إِنَّا نَحْنُ نَزَّلْنَا الذِّكْرَ وَإِنَّا لَهُ لَحَافِظُونَ



Waxaa ku sharaf mutay amarka daabicidda
jaamacan sharafta badan iyo tarjamada macnihiisa
Adeegaha Labada Xaram Ee Sharafta Badan
Boqor Salmaan ina Cabdulcaziiz, Reer Sucuud.
Boqorka Boqortooyada Sucuudi Carabiya

تشرف بالإشراف على طباعة هذه الترجمة لمعاني القرآن الكريم
خادم الحرمين الشريفين الملك سلمان بن عبد العزيز آل سعود
ملك المملكة العربية السعودية

وَقفٌ لِلّه تعَالىٰ من خَادم الحَرَمَيْن الشّريفَيْن
المَلِكِ سَلْمَان بْن عَبْد العَزِيز آل سُعُود
ولا يَجُوز بَيْعُه
يُوَزّع مَجَّانًا

تَرْجَمَةُ مَعَانِي القُرْآنِ الكَرِيمِ

إِلى اللُّغَةِ الصُّومَاليّة

إعداد :
مَحْمُود مُحَمَّد عَبْده

مُجَمَّعُ المَلِكِ فَهْدٍ لِطِبَاعَةِ المُصْحَفِ الشَّرِيفِ
بالمَدِينَةِ المُنَوَّرَة

Kitaabkan waxaa Allaah dartii u waqfay Adeegaha labada xaram ee sharafta badan, Boqor Salmaan ina Cabdilcaziiz, Reer Sucuud, iibkiisuna ma bannaana.
(Waxaa lagu qeybinayaa lacag la'aan)

QURAANKA KARIIMKA Iyo Tarjamada Macnihiisa Ee Afka Soomaaliga

Waxaa diyaariyay:
Maxamuud Maxamed Cabdi.

Mujammaca Boqor Fahad ee daabacaadda musxafka sharafta leh,
kuna yaalla Madiinah Munawwara

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

مقدمة

بقلم معالي الشيخ الدكتور
عبد اللطيف بن عبد العزيز بن عبد الرحمن آل الشيخ
وزير الشؤون الإسلامية والدعوة والإرشاد
المشرف العام على المجمع

الحمد لله رب العالمين، القائل في كتابه الكريم:

﴿... **قَدْ جَآءَكُم مِّنَ ٱللَّهِ نُورٌ وَكِتَٰبٌ مُّبِينٌ** ﴾.

والصلاة والسلام على أشرف الأنبياء والمرسلين، نبينا محمد صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ القائل: «**خيركُم مَن تعلَّم القرآن وعلَّمه**».

أما بعد:

فإنفاذاً لتوجيهات خادم الحرمين الشريفين الملك سلمان بن عبد العزيز آل سعود -حفظه الله- بالعناية بكتاب الله، والعمل على تيسير نشره، وتوزيعه بين المسلمين في مشارق الأرض ومغاربها، وتفسيره، وترجمة معانيه إلى مختلف لغات العالم.

وإيماناً من وزارة الشؤون الإسلامية والدعوة والإرشاد بالمملكة العربية السعودية، بأهمية ترجمة معاني القرآن الكريم إلى جميع لغات العالم المهمة؛ تسهيلاً لفهمه على المسلمين الناطقين بغير العربية، وتحقيقاً للبلاغ المأمور به في قوله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «**بلِّغوا عنِّي ولو آية**».

وخدمةً لإخواننا الناطقين باللغة الصومالية، يطيب لمجمّع الملك فهد لطباعة المصحف الشريف بالمدينة المنورة، أن يقدم للقارئ الكريم هذه الترجمة إلى اللغة الصومالية، التي قام بها فضيلة الشيخ: محمود محمد عبده، وراجعها الشيخ: عبد الرحمن شيخ عمر أحمد دينله، ومن قِبَلِ المجمع كل من: فضيلة الدكتور: عثمان بن معلم محمود بن شيخ علي، وفضيلة الدكتور: أحمد هادي شيخ علي الكيني.

ونحمد الله سُبْحَانَهُ وَتَعَالَىٰ أن وفق لإنجاز هذا العمل العظيم، الذي نرجو أن يكون خالصاً لوجهه الكريم، وأن ينفع به الناس.

إننا لندرك أن ترجمة معاني القرآن الكريم -مهما بلغت دقتها- ستكون قاصرة عن أداء المعاني العظيمة التي يدل عليها النص القرآني المعجز، وأن المعاني التي تؤديها الترجمة إنما هي حصيلة ما بلغه علم المترجم في فهم كتاب الله الكريم، وأنه يعتريها ما يعتري عمل البشر كلّه من خطأ ونقص.

ومن ثَـمّ نرجو من كل قارئ لهذه الترجمة أن يوافي مجمّع الملك فهد لطباعة المصحف الشريف بالمدينة النبوية، بما قد يجده فيها من خطأ أو نقص أو زيادة؛ للإفادة من الاستدراكات في الطبعات القادمة إن شاء الله.

والله الموفق، وهو الهادي إلى سواء السبيل، اللَّهُمَّ تقبل منا إنك أنت السميع العليم.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

Hordhac

Waxaa qoray: Dr. Cabdilatiif Cabdicaziiz Cabdiraxmaan Aala sheekh
wasiirka arrimaha lslaamka, dacwada iyo hanuuninta,
kormeeraha guud ee mujammaca.

Mahad dhammaanteed Allaa iska leh, ee ku yiri kitaabkiisa sharafta leh: (Alla xaggii waxaa idinkaga yimid nuur (Nebi Muxammad) ﷺ kitaab kala caddeeya (oo qur'aanka ah).

Ammaan iyo nabadgelyana Nebigeenna Muxammad ah ee ugu sharafta badan nebiyada iyo kuwa la soo diray dushiisha Allaha yeelo, ee yiri: "waxaa idinkugu kheyr badan kan barta qur'aanka, dadka kalena bara", intaa ka dib:

Waxaa farxad u ah Mujammaca Boqor Fahad ee daabacaadda kitaabka jaamaca ah ee sharafta badan kuna yaal Madina al-Munawara, inuu u soo gudbiyo aqristaha sharafta leh tarjamada macnaha quraanka kariimka ah ee uu afsoomaaliga ku qoray sheekh Maxamuud Maxamed Cabdi, uuna dib u eegay sheekh Cabdiraxmaan Sheekh Cumar Axmed Diinle.

Dhinaca mujammacana waxaa dib u eegay dr. Cismaan Macallin Maxamuud Sheekh Cali iyo dr. Axmed Haadi Sheekh Cali.

Sidaana waxaan u sameynay:

1) Iyadoo la fulinayo talooyinki habboonaa ee u adeegaha labada xaram ee sharafta leh boqor Salmaan Cabdilcaziiz reer Sucuud, Allaha dhowree, talooyinkaasoo ku saabsanaa in la iska xilsaaro kitaabka Alle, laguna dadaalo sidii loo fududeyn lahaa baahiddiisa. Loona kala gaarsiin lahaa muslimiinta ku kala nool adduunka dacalladiisa, sidoo kalana in lugu dadaalo fasiraadda kitaabka Alle iyo in macnihiisa loo tarjamo afafka kala geddisan ee dunida.

2) Rumeysnaan ay rumaysan tahay wasaaradda arrimaha islaamka, dacwada iyo hanuuninta ee Boqortooyada Sacuudi Carabiya mudnaanta ay leedahay u tarjamidda macnayaalka

qur'aanka kariimka ah afafka adduunyada kuwooda muhimka ah, si loogu fududeeyo fahamkiisa muslimiinta aan afcarabiga ku hadlin, iyo iyadoo laga dhabaynayo gaarsiinti la isku faray hadalki Rasuulka ﷺ "koley aayad noqotaba dadka diinka iga gaarsiiya".

3) Iyo sidoo kale adeeg loo adeegayo walaaleheenna afka soomaaliga ku hadla.

Allaah baanan uga mahad celinaynaa in uu na waafajiyay ka miradhalinta howshan weyn ee aan rajeyneyno in Alle dadka ku anfaco, dar Allana loola jeeday.

Annaku waxaannu dareensannahay - si kastoo tarjamada loogu dadaalo - inaanay ka gungaari Karin gudashada Macaanida waaweyn ee aad ka heleyso erayada qur'aanka kariimka ah ee aan iyadoo kale lala imaan karin.

Tarjamadanina ma dhaafsiisna fahamka qofkan sameeyay uu u leeyahay Quraanka. waxaana la soo gudboonaanaya tarjamadan gefka iyo nusqaanta la soo gudboonaata howl kastoo bani'aadan qabto.

Sidaas darteed waxaannu ka rajeyneynaa qof kastoo akhriya Tarjamadan in uu Mujammaca soo gaarsiiyo waxkastoo khalad ah (siyaado ama nusqaan) oo ay dhici karto in uu ka dhex helo. si ay uga qayb qaataan sixidda daabacadaha soo socda, haddii Alle idmo.

Allana waa midka waafajiya kheyrka qofka uu jecel yahay, waana midka jidka toosan ku hanuuniya dadka.

Allow naga aqbal shaqadan wanaagsan, Adigu waxaad tahay midka maqalkiisu Xeel dheer yahay, ee aad u cilmiga badan.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

الحمد لله الذي أنزل على عبده الكتاب ولم يجعل له عوجاً، والصلاة والسلام على رسوله الأمين محمد صلى الله عليه وعلى آله وأصحابه الكرام البررة ومن تبعهم بإحسان إلى يوم الدين، وبعد:

أحمد الله تعالى الذي مكنني أن أسهم في ترجمة معاني القرآن الكريم، والواقع أن هذا العمل ليس بالأمر الهيِّن، ولكن بعون الله وقدرته تُذلل الأمور، لذا شرعت في هذا العمل. ومن الأسباب التي جعلتني أكتب ما يلي:

١. أن يكون هذا العمل لي ذخراً عند الله يوم تجد كل نفس ما عملت من خير محضراً.

٢. الإسهام في خدمة القرآن الكريم وتوضيح معانيه للناطقين باللغة الصومالية، والذين تصعب عليهم اللغة العربية، عسى الله أن ينفعهم به.

٣. أن كثيراً من اللغات في العالم الإسلامي قد شاركت في هذا الموضوع لتتم الفائدة، غير أنه تبدو الحاجة والفراغ من جانب اللغة الصومالية.

٤. حدث أن تُرجمت بعض الكتب غير الإسلامية باللغة الصومالية ووزعت على المسلمين، وخاصة اللاجئين منهم، فلابد من تحرك تجاه ذلك.

هذه الأسباب وغيرها جعلتني آخذ عملي هذا مستمداً من الله العلي القدير العون والسداد، هذا ولربما يقال: لماذا تكتب معاني القرآن الكريم وتفسر باللغة الصومالية ولم يترك الناس يتعلمون اللغة العربية؟ حسناً، ولكن هل هذا يمنع تعلم اللغة العربية والاستفادة منها؟

أوليس العلماء الصوماليون كانوا يفسرون ويوضحون معاني القرآن الكريم - ولا يزالون - باللغة الصومالية عبر القرون والأجيال شفوياً في حلقات المساجد وغيرها؟

وكان لذلك الأثر الطيب والسبب في رسوخ قدم الإسلام في هذه المنطقة، وليس هناك فرق بين التوضيح بالمشافهة وبين الكتابة، مع أننا نرى بالتأكيد ضرورة تعلم لغة القرآن (العربية)، كما نرى أيضاً ضرورة فهم معاني القرآن العظيم بأي طريق خيّرة ونبيلة، وهل الأولى القعود والانتظار بدون عمل أو بذل الجهود في خدمة القرآن المجيد؟

وإذا نظرت إلى أسلوب الكتاب فأنت تدرك أنه لم تفسر معاني القرآن الكريم كله سابقاً باللغة الصومالية حسب علمي، وأن اللغة الصومالية في طور نموها. النقطة الثانية: هناك بعض حروف عربية لا توجد في الصومالية، ومع تحري عدم كتابتها حسب المستطاع، فإنه ستواجهك حتماً في بعض الأحيان مثل حرف (ث) المثلثة، حيث أخذنا بدلها حرف (TH) وحرف (ز) الزاي الذي أخذنا بدله حرف (Z) في أكثر الحالات، وربما حدث ذلك في حروف أخرى، وقد كتب النص القرآني باللغة العربية تحمل كل آية رقمها وفي مقابله معاني القرآن الكريم باللغة الصومالية، إلا أن الأرقام تأتي بالآيات في النهاية وفي المعاني في البداية.

ولم أكلف نفسي بترجمة معاني القرآن الكريم حرفياً، بل حاولت توضيح معانيه بإيجاز، وهناك فرق بين الأمرين (فيما أعتقد)، حيث الأخير مجرد تفسير للقرآن الكريم.

نقطة أخرى، لم أبحث عن لهجة خاصة صومالية قدر المستطاع، بل تحريت الصومالية الشائعة، ومع ذلك قد يبدو للبعض وجهة نظر.

وفي نهاية كل مجموعة من الآيات القرآنية وترجمة معانيها شرح موجز يشمل معاني الآيات المرتبط بعضها ببعض، وفي بعض الحالات نورد حديث الرسول صَلَّىٰٱللَّهُعَلَيۡهِوَسَلَّمَ أو قول صحابي أو عالم من علماء الإسلام المعروفين، أو تنبيهاً على حكم أو مسألة، أو بيان السبب الذي نزلت به السورة أو الآية، كل ذلك باختصار؛ لأن الكلام لا ينتهي حتى ينتهي الناس، ونحن قصدنا فهم جانب من معاني القرآن المبين، لا أن نذكر كل ما ورد فيها، والإسهاب يتعب إذا كان مفرطاً، ومع أننا قد بذلنا جهدنا في أن نقرب معنى الآية في حدود الإمكان، وراجعنا كتباً كثيرة حجة في هذا الموضوع خلال خمس سنوات من رحلتنا مع القرآن، مع كل ذلك لابد أن تقع هفوات، بيد أننا نتضرع إلى المولى القدير التواب الرحيم أن يتجاوز عنا ما صدر منا من هفوات، وأن يرزقنا النية الصالحة والعمل الطيب المتقبل، إنه قريب مجيب.

وفضل كتاب الله الحكيم وعِظَمُه، وفضل الاشتغال به تعلماً، ودراية وحفظاً وقراءة وتدبراً وتعليماً واتباع تعاليمه القيمة والعمل به مما لا يخفى على دارسيه. ونسأل الله جَلَّوَعَلَا أن يغفر لنا ولوالدينا وللمسلمين عامة، ولكل من له يدُ خيرٍ في إنجاح هذا العمل، ولكل من يستفيد منه من المؤمنين إنه نعم المولى ونعم النصير.

وقد تم بحمد الله بتاريخ ١١/٧ لعام ١٤٠٥هـ

محمود محمد عبده

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

Mahad Alle ayaa iska leh ee ah kan ku soo dejiyey Nabigiisa kitaabka quraanka ah ee toosan, naxariis iyo nabad galyana ha ahaato Rasuulka Muxamed ah korkiisa iyo ehelkiisii iyo asaxaabtiisii iyo inta wanaagga ku raacda tan iyo qiyaamada.

Intaas ka dib:

Waxaan ku mahadin Alleheenna sarreeye ee ii suuro galiyey inaan ka qayb qaato qoridda macnaha quraanka sharfta leh. Sida dhabta ahna camalkani ma fududa, hasa yeeshee kaalmaha Alle iyo awooddiisa yey arrimuhu ku jilcaan, saas darteed yaan u gudogalay arrintan. Sababaha igu xambaaray inaan qorana waxaa ka mid a:

1. Inuu ii noqdo camalkani kayd Alle agtiisa, maalintay naf kasta heli waxay camal fashay oo khayra oo muuqda.

2. Inaan ka qaybqaato u adeegidda kitaabka Alle ee quraanka kariimka ah, iyo u caddaynta macnihiisa dadka garan luuqadda soomaaliga ah, ee ay ku adag tahay luuqadda carabiga ah illeen waxay u dhawdahay in Alle ku anfacee.

3. Wax badan oo luuqadaha ka mida waxay ka qayb qaateen caalamka islaamka arrintan si faa'iidadu u badato, laakiin waxay ka muuqataa baahi iyo bannaani xagga luuqadda soomaaliga ah.

4. Waxaa dhacday in lagu turjumay kutubo badan oon islaam ahayn luuqadda soomaaliga ah, luguna qaybiyo muslimiinta, gaar ahaan qoxootiga, markaas waxaa lagama maarmaan noqotay in wax laga qabto arrintaas.

Sababahaas iyo kuwo kale yaa igu xambaaray billaabidda camalkan, annagoo ka kaalo warsan Allaha sare ee kara inuu na toosiyo, nana xoojiyo. Waxaa laga yaabaa in dad iswarsado maxaa loogu fasiri macnaha quraan luuqadda soomaaliga ah oon loo dayn dadku ha barteen luuqadda carabiga ahe, waa fiican tahay, miyeyse isdiidi in quraanka macnihiisana luuqadda soomaaliga ah lagu fasiro, isla markaas dadku barto kana faa'iidaysto luuqadda carabiga ah, sow ma ahayn culimadii hore ee soomaalida ahaa kuwii dadka ugu fasiri jiray uguna caddayn jiray macnaha quraanka -tan iyo hadda- si af ah quruumo badan,

xalqada masaajidka iyo meelo kalaba, taasoo reebtay raad fiican, sababna u noqotay sugnaanta gomadda islaamku gobalkan geeska.

Waxna uma dhexeeyo ku caddaynta quraanka odhaah ama qoraal, inkastoon rumaysanahay waajibnimada barashada luuqadda quraanka "carabiga" sidoo kale ku barashada macnaha quraanka wayn si kasto oo khayra oo wanaagsan, ma waxaa roon in layska fadhiisto oo wax uun la sugo camal la'aan, mise in dadaal lagu dhiibo u adeegidda quraanka sharafta leh? Haddaan eegno habka kitaabka waxaad ogtahay inaan kitaabka quraanka ah dhammaantiis lagu fasirin hadda ka hor -intaan ogahay- luuqadda soomaaliga ah, iyadoo luuqadduna ku jirto waqti korid. Arrinta labaad waxaa jira xuruuf qaarkeed aan laga helayn luuqadda soomaaliga ah sida :(ث)» waxaana baddelkeeda qaatay xarafka "th" iyo xarafka (ز) oon beddelkeeda qaatay xarafka "z" sida badan, kuwo kala na waa laga yaabaa .

Waxaana lagu qoray naska quraanka luuqadda carabiga ah iyadooy aayad walba wadato raqamkeedii taasoo ka yeeli ruuxu inuu u akhriyo sida kitaab jaamac ah, waxaana ka soo horjeeda macnihii quraanka oo luuqadda soomaaliga ah, hasa yeeshee raqamku aayadaha dhammaadkooda yuu iman, macnahana billoowga.

Kuma dhibin naftayda inaan u turjumo quraanka si xarfi ah, waxaanse isku dayey inaan u caddeeyo macnihiisa si kooban, waana kala duwan yihiin labada arrimood sidaan citiqaadin, illeen tan dambe waa uun fasiraad kaliyee.

Arrinta kale ma doonin lahjad gaara oo soomaali ah, waxaanse ku dadaalay soomaaliga guud, haddana laga yaabo in dadka qaarkii wax u muuqdo. Tarjamo kasta waxaan u dambeysiiyey sharax kooban oo kulmin macnaha aayadaha isku xidhan, mararka qaarkoodna waxaannu soo aroorinnaa xadiithka Nabiga (ammaan iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ama hadal asaxaabi, ama hadal mid ka mida culimadii lslaamka ee la yaqiinnay, ama ku baraarujin xukun ama xigmad, ama caddayn sababta suuraddu ku soo degtay, ama aayaddu, waxaa soo dhanna waa si kooban, illeen hadal ma dhammaado inta dadku ka dhammaan. Ujeedadeennuna waa in la fahmo dhinac ka mida macnaha quraanka cad, mase aha in wax walba la sheego. Hadalka

badanna waxbuu dhibaa markuu xadda ka baxo. Inkastoon isku daynay inaan soo dhawayno macnaha quraanka dadaalna aan ku dhiibnay intaan karro oo u noqonnay kutubo badan muddo shan sano dhexdeeda oon ku shuqloonayn arrintan, lana noolayn quraanka, haddana waxaa dhici kara gaf, waxaanse ka baryeynaa Allaha gargaara ee kara ee naxariista ee saamaxaadda badan inuu naga dhaafo wixii naga dhaca oo simbiriirixo ah, naguna arzuqo niyad fiican iyo camal wanaagsan, oo la aqbalo, Alle waa dhawe ducada ajiibee.

Fadliga kitaabka Ilaahay ee quraanka ah ee wayn, iyo fadliga isku shuqlintiisa: barasho, ogaansho, xifdid, akhrin, barid, fasiraad, raaciddiisa iyo ku camal falkiisu waa arrin aan ciddii baran ka qarsoonayn. Waxaana wax kaga ishaarray qoraalkannaga lagu magacaabo "culuunta furqaan".

Ugu dambayn waxaan Ilaaheenna wayn ee naxariista ka baryeynaa dambi dhaaf annaga iyo waalidiintanno, muslimiinta oo dhan iyo cid kasta oo gacan khayr ka gaysata kitaabka iyo cid kasta oo ka faa'iidaysata kitaabkan oo mu'miniinta ka mida. Alle isagaa gargaare fiican ehe.

Waxay dhammaatay qoriddii kitaabkan: 7/11/sanadkii 1405h.

Maxamuud Maxamed Cabdi.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

Hordhaca tarjamooyinka macnaha quraanka sharafta badan

Quraanka sharafta badani waa hadalkii Alle, xuruuf iyo macnaba, wuxuu ku soo dejiyay Nebi Muxammad ammaan iyo nabadgelyo dushiisa Alla ha yeelee, oo dunida u ahaa naxariis, u dige, bishaareeye, dadkana ugu baaqa Allahood, isaga oo amarka Alle ku socda, wuxuuna ahaa ilays if badan.

Halkanna waxaan kuugu soo gudbinaynaa qeexid kooban oo quraanka iyo waxa uu xambaarsan yahay ku saabsan.

Koowaad: qeexidda quraanka sharafta badan, iyo caddeynta magcaantiisa iyo tilmaamihiisa:

Quraanka sharafta badani waa hadalkii Alle, sarreeyee, laguna soo dejiyay Rasuulkiisa Muxammad ah, ammaan iyo nabadgelyo Alla ha yeelo dushiisee, loona waxyooday erayadiisa iyo macnihiisaba, kuna qoran musxafka, ummad tira dhaaftayna ay isa soo gaarsiiyeen, akhrintiisana Alle loogu dhowaado.

Allana isagaa ku magacaabay quraan waxyigii uu ku soo dejiyay Rasuulkiisa Muxammad ah, ammaan iyo nabadgelyo dushiisa Alla ha yeelee, oo wuxuu yiri, sarreeyee: (annagaa quraanka kugu soo dejinnay soo dejin) [Al-Insaan: 23]; waayo waxa loogu tala galay in akhriskiisa la badiyo oo aan la goyn.

Waxaa kale oo uu Alle ku magacaabay al kitaab, oo wuxuu yiri: (annagaa kitaabka xaqnimo kuugu soo dejinnay) [An-Nisaa': 105]; waayo waxa loogu tala galay in la qoro oo aan la beylihin.

Alle wuxuu quraanka ku tilmaamay in uu yahay: kala saare, xus, hanuun, iftiin, caafimaad, mid xikmadi ka buuxdo, ahna waano, iyo intaasoo kale oo tilmaama ah oo tusinaaya weynida quraanka sharafta badan, iyo in uu dhammeystiran yahay dhanbaalka uu xambaarsan yahay.

Erayga musxaf waxaa laga soo qaatay waraaqihii quraanka lagu qoray, waana magac ay bixiyeen saxaabadi Rasuulku si uu u muujiyo buuggii lagu qoray quraanka sharafta badan.

Quraanku waa waxyi Alle xaggii uu Jibriil nabadgelyo Alla ha yeelo dushiisee qalbiga Nebigeenna Muxammad ah ku soo dejiyay, oo Alle wuxuu yiri: (quraankuna waa soo dejin Rabbiga

caalamka. Waxaa ku soo dajiyay qalbigaaga Jibriil, si aad uga mid noqoto kuwa diga (rususha), (waxaanu ku soo djiyay) af carabi cad) [Shucaraa': 192-195].

Nebi Muxammadna nebiyadii Alle taa kagama duwaneyn, oo dhammaan walaalihiisaas malaku Jibriil waxyi ayuu Alle xaggii kaga soo dejin jiray, Allana wuxuu u doortaa ammaanadaas weyn cidduu doono, oo Alle wuxuu yiri: (Alle wuxuu ka doortaa malaa'igta rasuullo dadkana rasuullo, Allana waa maqal iyo arag badane) [Suuratul Xaj: 75] isagaana Alle u ogaal badan cidda ammaanadaa ku habboon iyo kaan ku habboonayn, oo uunkani dhammaan waa kuwo uu isagu abuurtay, Allana wuxuu yiri: (Allahaa wuxuu abuuraa wuxuu doono, doortaana) [Al-Qasas: 68].

Labaad: soo degitaankii quraanka:

Soo degitaanka waxyigu wuxuu ku billowday rasuulkeenna maalin isniinaad. Toddoba iyo tobanki bishii ramadaan, sannadkii 610 dhalashadi nebi ciise ka dib, iyada oo nebigu joogo buur buuraha Makkaad ka mid ah god ku yiillay laguna magacaabi jiray: Xiraa'. Wuxuuna Jibriil kula soo degay aayadahan: wax ku akhri (Nabiyow) magaca Rabbigaada abuuray (khalqiga), dadkana ka abuuray xinjiro, akhri Rabbina waa kan ugu sharafta badan ee qalinka (wax) ku baray (dadka), dadkana baray waxaysan aqoonnin) [Al-Calaq: 1-5]. Aayadahaasina waxay ahaayeen quraankii ugu horreeyay ee Rasuulkeenna ku soo dega, markaasuu xaaskiisi Khadiija ula soo noqday iyada oo wadnihiisu si xoog leh u garaacaayo heybadda quraanka iyo cabsi uu naftiisaba u baqay, wixii uu la kulmayna waa uu uga sheekeeyay oo wuxuu ku yiri: nafteydaan u baqay, waxayna ugu jawaab celisay: maya, marnaba taa ha ka baqin, qalbigaagana bishaaro u sheeg, waa igu dhaar Allee Alle ku hoojin maayo weligaa; waayo qaraabadaad xiriirisaa, runtaad sheegtaa, dadka taagta daran waad taakulaysaa, martidaad soortaa, dhibaatooyinka waaweynna dadka waad ka saaciddaa)).

Intaa ka dib Khadiijo waxa ay Rasuulkii la aadday xaggaa iyo ina adeerkeed Waraqa bin Nowfal, wuxuuna ahaa nin caqli iyo xikmad ba isku darsaday, waxayna ku tiri: ina adeerow, bal wiilka aad adeerka u tahay warkiisa dhageyso.

Markii Rasuulku uga sheekeeyay wixii uu arkay, Waraqa wuxuu ku yiri: kani waa malaku Jibriilkii[1] Muuse waxyiga u keenay, Alla

(1) Jibriil waa malagga loo xil saaray in uu Nabiyada waxyiga gaarsiiyo.

jeclaan lahaayaa in aan dhallinyaro ahay waqtiga aad dadka Alle ugu yeerayso, oo jeclaan lahaayaa in aan nolol ku gaaro kolka qoladaadu ku bixinayaan".

Rasuulku wuxuu yiri: oo miyay i bixinayaan?

Haa, ayuu ku yiri. Maba jiro nin hortaa la yimid waxa aad la timid oo kale oo aan la colaadin. Haddii Alle i gaarsiiyo maalinta lagu bixinayana si xoog leh ayaan kuugu gargaarayaa".

Waraqana wuxuu geeriyooday wax yar uun ka dib markii wadahadalkaasu dhex maray isaga iyo Rasuulka.

Quraanka sharafta badanina mar kaliya kuma soo wada degin Rasuulka Alle sida kitaabbadii Nabiyadii hore hal mar u soo degi jireen, isaguse wuxuu soo degaayay saddex iyo labaatan sannadood si tartiib tartiib ah, suurad ayaa soo degeysay mararka qaar iyada oo dhammeystiran, marar kalena aayado suurad gooni ah ka tirsan(1).

Ujeeddada uu quraanku tartiib tartiib ugu soo degayna waxay ahayd in la sugo oo la adkeeyo qalbiga Rasuulka, dhabarkiisana la xoojiyo, marba haddii ay soo noqnoqonaysay soo degidda waxyiga Jibriil u keenaayay, si uu tabar ugu yeesho macangagnimada mushrikiinta, iyo ka hor imaatinkoodi bilawgii dacwada ay ka hor yimaadeen wixii lala soo diray, Alle wuxuu yiri: (waxay dheheen kuwii gaaloobay maa lagu soo dejiyo Nabiga quraanka mar kaliya (isagoo dhan), saasaan yeellay, si aan u sugno qalbigaaga, waana kala saarsaarnay kala saarsaarid) [Furqaan: 32].

Sidoo kalena xikmad weyn oo xagga barbaarinta ku saabsan ayaa ku jirta tartiib tartiib u soo degidda quraanka, waxayna tahay in muslimiinta loo aayar aayariyo qaadashada cilmiga iyo ku dhaqanka axkaamta diinta; si ay ugu fududaato barashadiisa iyo fahamkiisuba, iyo inay ka soo baxaan mugdiyadi ay ka dhaxleen wixii ay ku taagnaayeen ee ah: jaahilnimo, gaalnimo, shirki, una baxaan iftiinkii iimaanka, towxiidka, iyo aqoonta.

Saddexaad: qoriddii quraanka:

Siyaabaha ugu mudan ee hadallada qiimaha badan lagu ilaalin karo waxaa ka mid ah in la qoro, hadalka aan la qorinna wuxuu halis u yahay in la illaawo, haddaba waxaa lama huraan noqotay in quraanki la qoro maadaama uu toosiye u yahay caalamka oo dhan inta qiyaamadu ka dhacayso.

---

(1) ha la eego: tafsiirka Dabari (19/10), almurshid alwajiiz bogga 28, ee uu qoray Abuu Shaama Almaqdisi.

Qoridda quraankuna waxay nasiib u yeelatay dadaalkii iyo danayntii Nebiga, oo waxa uu amar ku siiyay saxaabadiisii qaarkood garanaayay sida wax loo qoro in ay quraanka qoraan, wuxuuna ka dhigtay qoraayaal waxyiga u qora, waxaana raggaas ugu magac dheeraa Zayd bin Thaabit oo ansaarta ka mid ahaa(1).

Rasuulka Allena waxaa caada u ahayd mar walba oo quraan ku soo dego in uu xifdiyo, kadibna u yeeriyo mid ka mid ah qoraayaalkiisii si uu u qoro, wuxuuna ku dhihi jiray: " aayadahan waxaad dhex gelisaan suurad heblaayo"(2), wuxuuna u sheegi jiray magaca suuraddaa, wuxuu fari jiray in ay ku dhex qoraan, ka dibna wuxuu amar ku siin jiray saxaabadii in ay bartaan oo ay dusha ka qabtaan qaybtaas quraankii ka mid ah ee soo degtay, sidaasaana quraankii dhammaantiis waqtigii Rasuulka lagu qoray cadad waraaqo ama hargo ka sameysan(3).

Jibriilna wuxuu quraanka la akhrin jiray Rasuulka sannad walbaba hal mar, sannadkii u danbeeyayse wuxuu la akhriyay laba jeer, isaga oo aayadihiisa iyo suuradihiisuba isugu xigaan sida uu hadda musxafkeenna maanta ugu qoran yahay, taasoo ka dhabeysay hadalkii Alle yiri: (annagaa laabtaada ku kulmin kuuna akhriyi. Ee markaan akhrinno raac akhriskiisa) [Alqiyaama: 17-18], iyo hadalkii kale ee Alle: (waxaan kaa yeelaynaa akhriye quraanka, halmaamina maysid) [Al-Aclaa: 6].

Afaraad: aruurintii quraanka ee waraaqo lagu aruuriyay:

Dhimashadii Rasuulka ka dib ayaa khaliifkii toosnaa ee Abuubakar waxa uu amar ku bixiyay in quraanki lagu aruuriyo waraaqo habeysan, si aan qaar quraankii ka mid ah loo waayin, haddii dadkii xafidsanaa dhintaan ama cadadkii waraaqaha ama hargaha ahaa ee markii hore lagu qoray baaba'aan.

Waxaana howshaa u istaagay Zayd bin Thaabit, markii dib u eegid lagu sameeyay lana hubiyay inuu waafaqsan yahay wixii hore ugu qornaa cadadka waraaqaha ama hargaha ahaa, sidaa oo kalena uu waafaqsan yahay quraankii laabaha lagu hayay, ayaa waraaqihii laga soo guuriyay waxaa la dhigay guriga Abuubakar

---

(1) tafsiirka dabari (1/28).

(2) sunan abii daawuud (786), sunan tirmidi (3086), mustadrak alxaakim (3325), wuxuuna yiri xaakim: waa xadiith sax ah oo waafaqsan shuruuddii bukhaari iyo muslim mase aanay warin.

(3) saxiixul bukhaari (4592,4593).

waanay yaalleen ilaa iyo intii uu ka dhimanayay, kadibna waxaa loo wareejiyay gurigii khaliifkii labaad Cumar bin Khaddaab, markii uu dhintay isagiina waxaa lagu keydiyay gurigii gabadhii uu dhalay ee hooyadeen ahayd, ee haweenka Rasuulka ka mid ahayd, Xafsana la oran jiray[1].

Markii uu islaamku dunida ku faafay, muslinkuna u baahdeen musxafyo ay akhristaan, ayaa saxaabada qaar kula taliyeen khaliifkii toosnaa ee Cismaan bin Caffaan in ay lama huraan tahay in dadkii la isugu keeno musxaf lagu raaco sida quraanka loo akhrinaayo, intaas ka dib Cismaan waxa uu amar ku siiyay koox saxaabadii ka mid ah quraankana xafidsanayd, sida wax loo qorana taqaannay, in ay arrintaa u istaagaan, waxaana oday u ahaa Zayd bin Thaabit, iyagoo shaqadooda gundhig uga dhigay waraaqihii waqtigii Abuubakar quraanka lagu aruuriyay, waraaqahaas ayay hal musxaf ku wada aruuriyeen, ka dibna nuqullo dhowr ah ka sameeyeen, magaala kasta oo magaalooyinkii waaweynaa ee islaamka ka mid ahna nuqul ayaa loo diray, muslimiintiina Cismaan waxa uu faray in ay dhowrkaas nuqul nuqullo badan ka sii sameystaan.

Dhammaan kitaabbada quraanka ee maanta caalamkeennan laga helaayo, ama farguri ha ku qornaadaan ama madbacado ha daabacaane, asalkoodu waxa uu ka soo jeedaa musxafyadii waagaas hore la qoray loona kala diray waddammadii islaamka ee waagaas jiray, waxna ugama duwana xag erayo iyo weero, iyo xagga sida uu isugu xigxigo.

Ilaa iyo maantadan la joogo muslimiintu waxa ay aad ugu dadaalaan daabacaadda musxafka sharafta badan iyo la jaanqaadidda waxa ku cusub siyaabaha kala duwan ee wax loo daabaco, qalabka iyo tiknolojiyada la adeegsado; si loo gaaro heerka ugu sarreeya wanaagga iyo aqoon farsamo oo lagu qoro quraanka si waafaqsan sidii waagii khaliif Cismaan bin Caffaan loo qoray, waana habqoraalka loo yaqaan habqoridda Cismaan.

Mujammaca Boqor Fahad ee daabacaadda musxafka sharafta badanna waa uun mid ka mid ah calaamadaha muuqda ee tusinaaya daryeelka sare ee quraanka la daryeelaayo, iyo dadaalka madaxda boqortooyada sucuudigu ku bixinayaan u adeegiddiisa, iyo sidii ay muslimiinta ugu fududeyn lahaayeen helitaanka musxaf sharaf badan oo sida ugu qurxoon loo

---

(1) saxiixul Bukhaari(4986), sunan Tirmidi (3103), musnad Axmed (76).

daabacay, loona jallaaday, wanaajin, dhowrid, iyo farsama wanaagna loo dhammeeyay.

Shanaad: tartiibta musxafka iyo sida loo qaybqaybiyay:

Quraanku waxa uu ku bilawdaa faataxada waxa uuna ku dhammaadaa qul-acuudu-bi-rabbinnaas, waxa uuna ka kooban yahay 114 suuradood, sidaas uu isugu xigana waxaa laga soo gaaray Rasuulkeenna, la isugumana xijin sidii uu u soo kala hor degay, oo suuradda iqra' (al-calaq) iyadaa quraanka ugu soo hor degtay, sidaas oo ay tahayna waa suuradda 96aad tartiibta suuradaha kitaabka quraanka.

Saxaabaduna waxa ay ka barteen sida aayadaha iyo suuraduhu isugu xigaan akhrintii Rasuulku ammaan iyo nabadgelyo dushiisa Alla ha yeelee uu akhrin jiray quraanka sharafta badan(1).

Waqtigan la joogo musxafka waxaa loo qaybiyaa soddon juz, juz kastana laba xizib ayaa loo qaybiyay, xizib kastana afar rubac ayaa loo sii qaybiyay.

Qaybinta sidaa ahi badankeed waa dadaal culimo si muslimiinta loogu fududeeyo quraanka akhriskiisa.

Lixaad: barashada quraanka sharafta badan.

Muslimiintu waxa ay aad xoogga u saareen barashada quraanka sharafta badan, xafidkiisa, iyo in loo akhriyo sidii Rasuulkeenna loogu soo dejiyay, saxaabadii quraanka xafidsaneyd iyo akhriyayaalkoodii waxa ay u istaageen in ay ardadoodii quraanka baraan, ilaa ay ka sugeen naskii quraanka, aayad walbana dul istaajiyeen ilaa ay macnaheeda kasmo u yeesheen, sidaasayna taabiciintii cilmiga quraanka iyo ku dhaqankiisaba u barteen.

Intaa ka dibna nimankii quraanka xafidsanaa ee taabiciinta ahaa waxa ay asaaseen madrasado la isugu gudbiyo sida quraanka loo aqriyo, iyagoo aan dhinacna uga leexanayn wixii ay saxaabada ka qaateen ee leh: akhrin, erayadii oo xaqooda la siiyo, tirada xuruufta iyo erayada quraanka, sida ay isugu xigaan suuradihiisa iyo aayadihiisu, tajwiidkiisa, gudasho wanaagga, iyo sida loo tartiiliyo, markaasaa quraankii noqday mid la barto, la qaybo oo dusha laga qabto, oo kan ardayga ahi uu ka qaato shiikhiisii quraanka xafidsanaa si fool ka fool ah, laguna akhrinaayo af

---

(1) Almuqnic, bogga 8aad. Sheikh Daani ayaa imaam Maalik ka soo guuriyay.

carabi faseex ah, una qoyan una cusub sidii Rasuulka loogu soo dejiyay iyada oo aan waxna iska beddelin ilaa maantadan la joogo.

Quraanka sharafta badan qirooyin dhowr ah ayaa lagu akhriyaa, oo ah sida loo gudanaayo kelmadaha quraanka iyo xuruuftiisa iyo sida loogu dhawaaqo, taasoo ay taabiciintu ka qaateen akhriyayaashii quraanka xafidsanaa ee ka mid ahaa saxaabadii Rasuulka, kuwaasoo iyaguna markooda ka qaatay Rasuulka sida quraanka loo akhriyo, kana heysta isaga oggolaansho iyo idan.

Qirooyinkaas waqtigan hadda la joogo waxaa ugu caansan:

- Qirada Caasim, werinti ardaygiisi la oran jiray Xafse bin Suleymaan.
- Qirada Naafic, werinti ardaygiisi Warash, iyo werinti kale ee ardaygiisii labaad ee Qaaluun.
- Sidoo kale werintii Duuri ee qiradi Abuu Camri Albasri.

Toddobaad: tafsiirka quraanka sharafta badan:

Quraanka fasiraaddiisa waxaa loola jeedaa caddeynta macnihiisa[1],waxaana uun lagu gaari karaa halka la hiigsanaayo in la dul istaago tusintiisa iyo macnihiisa, Allana sarreeyee waxa uu ku tirtirsiiyay dadka quraanka akhrinaaya in ay macnihiisa fahmaan, marki uu Alle ceeb ka hufnaayee yiri: (waa kitaab aan kugu soo dajinnay oo barakeysan, si ay u fiiriyaan dadku aayaadkiisa iyo inay waantoobaan kuwa caqliga leh,) [Saad: 29], tadabburka macnihiisuna waa fahmid.

Rasuulkuna waxa uu u caddeyn jiray saxaabadiisa hadba wixii ka dheeh gala xagga macnaha quraanka[2], in kasta oo aanayba u baahan in ay wax badan ka weydiiyaan macnaha quraanka, oo waxaa kaga filnaaday aqoontii durugsanayd ee ay u lahaayeen afkooda, iyo quraanka oo afkooda ku soo degay, wixii waayahaa ka danbeeyay markii waqtigu sii dheeraadaba waxaa badanaysay baahida dadku u qabaan in macnihii quraanka loo caddeeyo.

Waxaana ka guntamay wixii laga soo weriyay Rasuulka iyo saxaabadiisa iyo taabiciinti unug cilmiga tafsiirka ah, loona bixiyay: tafsiirki la soo guuriyay, oo loo arko in uu yahay waddada

---

(1) Ha la eego: Al-Burhaan ee Zarkashi leeyahay, (1/13).

(2) Ha la eego: Tafsiirka Dabari (1/37), muqaddimada usuulu tafsiirka Ibnitaymiyyah bogga 35.

ugu muhimsan ee loo maro fahanka quraanka; maxaa yeelay waxa uu noo caddeynayaa sida facii hore aaydaha quraanka u fahmeen, taasoo ay ka kasbadeen afkooda carabiga ah oo ay meel sare ka joogeen, iyo iyaga oo joogay lana noolaa wixii dhacaayay markii quraanku soo degaayay.

1) Noocyada kala duwan ee tafsiirka:

Waa ay kala duwan yihiin hababka ay ku socdaan culimada tafsiirku hadba sida uu yahay cilmiga ay daneeyaan, waxaana soo baxay tafsiirro xoogga saara xagga luqadda marka ay quraanka fasirayaan, iyo kuwa kale oo xoogga saara caddeynta axkaamta fiqiga, iyo kuwo kale oo ku dadaala dhinacyada: taariikhda, waxyaabaha caqliga bani'aadanka lagu ogaado, ama xagga akhlaaqda iyo ku dhaqanka diinta iyo wixii la mid ah, culimaduna iyaga oo taa ka duulaya waxa ay tafsiirka u qaybiyeen laba qaybood:

- Tafsiir la soo guuriyay, waana kan laga soo guuriyay Rasuulka iyo saxaabadiisa iyo taabiciinta.
- Tafsiir aragti iyo dadaal ku qotoma laguna taagay tiirar cilmi saxa ku dhisan.

2) Siyaabaha ugu wanaagsan ee wax loo fasiro, iyo xeerarka lagama maarmaanka u ah:

Tafsiirka la soo guuriyay ayaa mudnaanta leh marka quraanka la fasiraayo; maxaa yeelay waxaa laga soo gaaray Nebigi iyo saxaabadiisi, iyo kuwii ayaga wax ka bartay ee loogu yeeri jiray taabiciin, iyagaana dadka kaga aqoon badan.

Haddiise fahamka aayaduhu u baahdo caddeyn dheeraad ah oo laga waayay tafsiirkii la soo guuriyay, qofka quraanka fasiraya waxaa looga baahan yahay in uu ilaaliyo xeerarkan soo socda:

1. Waa in uu xeeriyaa wax Alla wixii ku sugnaaday tafsiirka la soo guuriyay oo caddeynaaya macnaha aayadaha, waana in uu iska ilaaliyaa in uu la yimaado wax ka hor imaanaaya.
2. Waa in tafsiirkiisu waafaqaa macnayaalki guud ee quraanka ku jiray sunnaduna caddeysay, umana bannaana qofka quraanka fassiraaya in uu iska billowdo tafsiir ka hor imaanaaya macnayaalkaas, maxaa yeelay quraanku waa uu is fassiraa ee isma buriyo, sunnaduna waxay caddeysaa oo fasiraad dheeraad ah ka sii bixisaa wixii quraanka si duuduub ah loogu sheegay.

3. Waa in uu aqoon u leeyahay waxa erayadu tusinayaan, sida weeruhu isu saaran yihiin, iyo siyaabaha kala duwan ee weeraha loo isticmaalo, dhammaanna waa inay waafaqsan yihiin xeerarka u degsan luqadda carbeed, maxaa yeelay quraanku af-carbeed ayuu ku soo degay, waxaana lagama maarmaan ah in loo fahmo si xeerarka afkaa waafaqsan.
4. Aayadaha kuwooda mutashaabiha ah waa in muxkamka loo celshaa, maxaa yeelay quraanka sharafta badani isagaa is fasiraya, qaarkiis qaarka kale, aayadaha quraanka badankoodna waa muxkam, macnahooda aanu mugdi ku jirin, waxaase ka mid ah kuwa kale oo mutashaabih ah, macnahooduna dadka qaar ka dheeh geli karo, in loo celiyaa muxkamkana waxa ay ka qayb qaadaneysaa in la fahmo, macnaheeduna caddaado, Allana waxa uu yiri: (Alle waa kan kugu soo dejiyey kitaabka, waxaana ka mid ah aayado sugan (macnahoodu cad yahay) oo ah hooyada quraanka (asalkiisa) iyo kuwa kale oo isu eg, kuwa qalbigoodu leexasho ku jirto waxay raacraacaan kan is shabbaha (isu eg) doonid fidmo (xumaan) iyo doonid ta'wiil (leexin fasir) darteed, ma jiro wax og (dhabta fasirka kaas, iyo waxa uu ku danbayn) Alle mooyee. Kuwa ku xididdaystay cilmiga waxa ay dhihi: waan rumeynay kaas, dhammaanna wuxuu ka ahaaday Alleheen agtiisa, mana waantoobo kuwa caqliga leh mooyee.) [Aala-Cimraan:7].
5. In la weheshado cilmi saynis ka kiisa sugan ee la hubo marka la fasirayo aayadaha ka hadlaya koonka, oo aan lagu camcamin aragtiyo cilmiyeed aan weli sugnaannin tafsiirka quraanka sharafta badan, si aanan quraanka loogu saarin macnayaal aanu xammili karin.
6. In laga digtoonaado leexinta fasiraadaha xunxun ee macnayaalka hadalka Alle ka weecinaaya xaqiiqooyinka shareecadeenna hufan, oo dhinac mareysa xeerarkii afka carbeed lahaa, iyada oo ay dhici karto in ujeedku yahay isku day kas ah in diinti la beddelo, ama jaahilnimo ay ku bixineyso qofka waxaasi ka dhaceen uusan aqoon u lahayn luqaddi carbeed iyo sida ay wax u tusineyso, iyo siyaabaha kala duwan ee weeraheeda loo isticmaalo, sidaa oo kalena sababtu waxa ay noqon kartaa macnayaal baadil ah oo uu qofku ismoodsiinaayo hadlka Allese aan ku habboonayn marnaba.

Siddeedaad: mucjizada quraanka sharafta badan:

Icjaaz waxaa lagu qeexaa in uu yahay: tilmaan wax ka baxsan in awood loo leeyahay asaga oo kale in lala yimaado, waxaasi wax la qabanaayo ha ahaadaan, ama talo maamul.

Mucjizana waa tilmaan dhacdo ku tusinaysa calaamadaha iyo xujooyinka nebiyada Alle iyo rasuulladiisa (ammaan iyo nabadgelyo dushooda Alla ha yeelee), erayga mucjizana quraanka kuma jiro waxaase laga helayaa erayada aayad, burhaan iwm.

Quraanka sharafta badani waa hadalki Alle, waxaana ka buuxa wax marnaba isaga oo kale aanay dadku la imaan karin,oo ah dhammeystirnaan xagga macnaha ah, qurux badnaan xagga aayadaha iyo erayada iyo sida uu u dhisan yahay ba, Alle wuxuu yiri: (alif, laam, raa' [waa xuruuf ku tusin mucjisada quraanka], kitaabka quraanka ahna waa mid la sugay aayadihiisa markaas lagana caddeeyey Allaha falka san ee wax walba og xaggiisa.) [Huud:1].

Mushrikiintii qureysheed waxa ay hore isugu dayeen in ay shaki geliyaan halka uu quraanku ka soo jeedo, sidoo kalena waxa ay isku dayeen in ay dadka ka leexiyaan rumayntiisa, una adeegsanaaya been abuurasho iyo shubhooyin la kiciyo(1), markaasaa Alle soo dejiyay aayado uu ku taxaddinaayo (caraadinaayo) oo iyaga laga dalbaayo in ay quraanka oo kale keenaan, ama toban suuradood oo ka mid ah, ama hal suurad kaliya, haddii ay run sheegaayaan(2), kolki sidaa laga dalbayna waa ay caajizeen oo awoodi kari waayeen, iskana qirteen in quraanku luqaddoodaba ha ku soo degee aanay suuragal ahayn in isaga oo kale lala yimaado amaba wax u eg, Alle waxa uu yiri: (mise waxay odhan wuu been abuurtay, waxaad dhahdaa la imaadda suurad la mida una yeedha ciddaad kartaan oo Alle ka soo hadhay haddaad run sheegaysaan) [Yuunis:38].

Quraankuna waxa uu cod dheer oo meel kasta gaaray ku faafiyay in dadka iyo jinniguba haddii ay iskaashadaan aanay quraankan sharafta badan oo kale la iman karin, Allena waxa uu yiri: (waxaad dhahdaa hadday u kulmaan insi iyo jinni inay la yimaadaan quraankaan oo kale lama imaan karaan wax la mida qaarkood qaar haba caawiyee) [Israa': 88].

---

(1) Ha la eego aayadahan: ancaam: 7, 25, anbiyaa›: 5, saba›:43, yaasiin: 69, saafaat: 36, saad: 4, ad-duur: 30.

(2) Ha la eego aayadahan: albaqara: 23, yuunus: 38, huud: 13, ad-duur: 34.

Ma jiro qof la iman kara quraankan sharafta badan oo kale, maxaa yeelay waa hadalki Alle oo aanu u ekeyn hadalka dadku, waana calaamad iyo xujo marka laga fiiriyo erayadiisa, aayadihiisa, luqaddiisa, iyo waxa uu kulansaday ee ah bayaan iyo balaago sawirradood, iyo waxa kale ee ka buuxa ee ah warar iyo sheekooyin dhab ah, iyo waxa kale ee uu kulansaday ee axkaam iyo shareeco ah, saameyn xooggan oo xag nafeed iyo xag dareen ba leh, iyo waxyaabaha kale ee ku jira ee ah aqoon adduuneed dhab ah oo heerkeedu sarreeyo.

Culimada yaqaan fiisigiska, nafleyda, xiddigiska, takhtarnimada ayaa waxaa badan inta uu ka amakaagiyay ka hadalki uu quraanku ka hadlay xaqiiqooyin cilmi ku dhisan, tilmaamo uu tilmaamay waxyaabo kawnka ku saabsan, kuwaasoo xiriir la leh cilmiyada ay culimadaasi aqoonta durugsan u leeyihiin, iyada oo lagu cabbiray weero cilmiyeysan khalad yarna laga ilaaliyay, oo aanay dhici karin in ay ka soo baxdo qof ummi ah oo aan wax akhrin waxna qorin kuna dhex noolaa ummad ummi ah, iyo caalam aan cilmigaas wax aqoona u lahayn, taasoo sabab u noqotay in culimadaas qaar ka mid ahi soo islaamaan, maxaa yeelay waxa ay ogaadeen in waxa quraanku ka hadlayo aanu noqon karin hadal dadeed, ee uu yahay hadalka Allihi abuuray kawnkan iyo aadanahaba.

Badanaa aayadaha quraanka ee ku tusinaaya kelinnimada Alle, sarreeyee, iyo sida uu wax u abuuray ee la yaabka leh, Alle waxa uu yiri: (waxaannu ka tusin aayaadkannaga jahooyinka iyo naftooda intey uga caddaato inuu quraanku xaq yahay, miyuuna ku filleyn Alle inuu wax kasta og yahay) [Fussilat: 53].

Sagaalaad: tarjamada macnayaalka quraanka sharafta badan:

Tarjamadu waa in hadal luqad laga soo raro mid kalena loo guuriyo[1], arrintaasina kama marnaan karto dhibaatadeeda, maxaa yeelay qaab qoraalka luqadeed waa mid ka mid ah qaybaha waxa qoran, waxaana adkaan karta in la dhowro macna luqadeedki hab qoraalka marka la doonayo in luqad kale loo tarjamo[2].

---

(1) Ha la eego lisaanul carab (مادة ترجم).

(2) Ha la eego: dalaalatul alfaad, Ibraahim Unays bogga 171-175, fannu tarjama, Maxammad Cawad Muxammad bogga 19.

Mar haddii dhib sidaa oo kale ah lagala kulmayo in wax laga soo tarjamo nusuus aadami curiyay, waxaa la hubaa in arrintu sidaa ka cuslaanayso marka la doonayo in quraanka sharafta badan la tarjamo, maxaa yeelay waa hadal ki Alle oo dhinaciisa laga soo dejiyay, luqaddiisuna carabi tahay, waana waxyi Alle xaggii ka yimid erayada iyo macnuhuba, umana fududa in qofi sheegto in macnayaalka quraanka sharafta badan uu dhammaantood koobay, ama uu awoodo in uu erayadi quraanka dib u curiyo si la mid ah sidii uu luqadda carabiga ku ahaa.

Innaga oo maanka ku haynna dhibka laga maraayo tarjamada quraanka sharafta badan, haddana culimada islaamku waxa ay adkeeyeen in ay lama huraan tahay in dadyowga adduunka ku nool afafkooduna kala jaadka yihiin la gaarsiiyo quraanka sharafta badan iyo dhambaalka uu xambaarsan yahay, wadda kale oo lagu gaari karo yoolkaasina ma jirto oo aan ka ahayn tarjamada[1].

U tarjamidda quraanka sharafta badan loo tarjamo luqooyinka kale laba siyaabood ayay u dhacdaa[2]:

1. Midi waa in la tarjamo macnayaalki quraanka sharafta badan, waana tarjamo aanu la socon tafsiir dheeraad ahi, waxa ayna ku gaabsataa caddaynta waxa laga fahmaayo erayada naska quraanka.
2. Tan kale waa tarjama tafsiireed lagu xoojiyo caddeymo iyo tusaalooyin, waxa ayna taagan tahay booski fasiraad quraanki sharafta badnaa lagu fasirayo luqad kale oo aan carabi ahayn.

Si kasta oo ay tarjamadu u heer sarreyso, amaba turjumaanku ugu xeeldheer yahay labada luqadood, una yaqaan macnaha aayadaha, haddana waxa uu tarjamay quraan laguma magacaabi karo, laba sababood awgood[3]:

B- quraanka sharafta badani waa hadalki Alle, sarreeyee, luqad carabi ahna ku soo degay, afmaalnimo iyo isku toosnaanna

---

(1) Ha la eego: ibni taymiyyah, majmuuculfataawaa (4/116).

(2) Ha la eego: ibni taymiyyah, majmuuculfataawaa (4/115, 542), al-tafsiir wal-mufassiruun (1/23) oo uu leeyahay Maxamad Xuseen Al-Dahabi.

(3) Ha la eego: Majmuuca sharx Al-muhadab, ee Nawaawi leeyahay (3/342).

meesha u sarreysa ka jooga, dib u cabbiridda aayadihiisa luqad kale lagu cabbiraahi waxa ay meesha ka saareysaa in lagu magacaabo quraan.

T- tarjamadu waxa ay cabbiraad ka tahay fahanka tarjumaanka ee la xiriira macnayaalka quraanka sharafta badan, waxa ayna marka dhinacaa laga eego u eg tahay tafsiirka, oo sida tafsiirkaba aan quraan loo lahayn ayaa aan tarjamadana sidaa oo kale quraan lagu magacaabi karin.

Haddaba si ay tarjamadu u noqoto mid loo qaateen ah waa in laga helo xeerarki culimadu u dejiyeen caddeynta macnaha quraanka iyada oo aad la isaga dhowrayo in tarjumaanku gabbaad ka dhigto tarjamada si uu ugu dhex faafsado macnayaal beddelan oo ka soo horjeeda macnihii saxda ahaa, weerarna ku ah wax Alla wixii muslinku weyneeyaan oo xurmeeyaan shareeco iyo cibaadaba, waana waxa fadareeyay dhowr tarjamo oo ay sameeyeen kuwa mustashriqiinta ka mid ah, ama kuwa muslin sheegta isla markaana caqiiddooyin faasida xambaarsan oo dadaal dheer ugu jira sidi meesha looga saari lahaa diinta islaamka ee weyn iyo waxyaabaha ay qiimeyso, dhaawacna loo gaarsiin lahaa caqiiddada saxda ah iyo shareecadeenna naxariistu ka buuxdo.

Iyada oo waxaas oo dhan laga duulaayo ayaa uu Mujammaca Boqor Fahad ee daabacaadda musxafka sharafta badani dusha u ritay soo saaridda tarjamooyinka macnaha quraanka sharafta badan oo lagu kalsoonaan karo, iyada oo ay ka tahay dadaal uu ku dadaalaayo gaarsiinta dhambaalka quraanka ee sarreeya dadka aan carabiga ku hadlin, laguna gaarsiiyo afafkoodi hooyo.

Mahad oo dhammi Allihi caalamka abuuray ayaa ay u sugnaatay, ammaanti Allena ha gaarto Nabigeenna Muxammad ah, ehelkiisa, iyo asxaabtiisi dhammaan, iyo kuwii wanaagga ku raacay ilaa qiyaamuhu ka dhacaayo.

Suurat Al-Faatixah

سُورَةُ الفَاتِحَةِ

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ ﴿١﴾

1. Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

ٱلۡحَمۡدُ لِلَّهِ رَبِّ ٱلۡعَٰلَمِينَ ﴿٢﴾

2. Mahad Alle ayaa iska leh ee barbaariyaha caalamka ah (koonka).

ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ ﴿٣﴾

3. Ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

مَٰلِكِ يَوۡمِ ٱلدِّينِ ﴿٤﴾

4. Ee hanta maalinta abaalmarinta (qiyaamada).

إِيَّاكَ نَعۡبُدُ وَإِيَّاكَ نَسۡتَعِينُ ﴿٥﴾

5. Adiga unbaan ku caabudaynaa, adiga unbaanna kaa kaalmo waydiisanaynaa (Allow).

ٱهۡدِنَا ٱلصِّرَٰطَ ٱلۡمُسۡتَقِيمَ ﴿٦﴾

6. Ee nagu hanuuni jidka toosan (xaqa).

صِرَٰطَ ٱلَّذِينَ أَنۡعَمۡتَ عَلَيۡهِمۡ غَيۡرِ ٱلۡمَغۡضُوبِ عَلَيۡهِمۡ وَلَا ٱلضَّآلِّينَ ﴿٧﴾

7. Jidka kuwii aad u nicmaysay eedan u cadhoonnin dhuminna.

Suuraddani waa suurad wayn, kitaabka Ilaahayna ka billowdo salaaddana in lagu akhriyo ay waajib tahay. Kulmisatayna ammaanta Alle, mahaddiisa, qiyaamada, cibaadada Alle iyo kaalmo waydiisigiisa iyo inuu ku toosiyo jidka toosan ee xaqa ah, jidkaasoo ah kay qaadeen dadkii fiicfiicnaa ee Alle u nicmeeyey oo ahaa Nabiyadii, rumeeyayaashii, shuhadadii iyo kuwii suubbanaaba ee ka leexday waddada kuwii loo cadhooday ee yuhuudda ahaa iyo kuwii dhumay ee nasaarada ahaa.

Waxaana lagu magacaabaa suuraddan magacyo badan oy ka mid tahay hooyada quraanka, Nabiguna (ammaan iyo nabadgelyo Alle korkiisa ha yeelee) waxaa laga weriyay: amar kastoon lagu billaabin bisinka waa naaqus. Aad

ayuu u taag daran yahay xadiithku. Rasuulku (ammaan iyo nabadgelyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: salaaddu uma jirto ruuxaan akhriyin faataxada. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim.

Fadligeedana halkan kuma soo koobi karno, waxaase fiican in la fahmo waxay kulmisatay laguna dhaqmo, Alle na dhab loo caabudo, dhabna looga kaalmo waydiisto. Had iyo jeerna la digtoonaado, hanuun iyo toosnaanna Alle la warsado iyo inuu kaa duwo jidka xun ey qaadeen xaqdiidayaashu iyo gaalada dhammaanteed.

Rasuulkuna (ammaan iyo nabadgelyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: dhugbadane waa ruuxa naftiisa xisaabiya una camal fala geeri dabadeed. Waxaa wariyey imaam Axmed iyo kuwo kale. **[Al-Faatixah: 1-7].**

Suurat Al-Baqarah

سُورَةُ ٱلْبَقَرَةِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

الٓمٓ ﴿١﴾

1. Aad baa macnaheeda looga hadlay, waxaana la sheegay inay magaca suuradda tahay, ama ay ku tusin mucjisadda quraanka, Alle unbaa ogna waa la dhahaa.

ذَٰلِكَ ٱلْكِتَٰبُ لَا رَيْبَ ۛ فِيهِ ۛ هُدًى لِّلْمُتَّقِينَ ﴿٢﴾

2. Kitaabkaas (quraanka) shaki kuma jiro, hanuunbaana ugu sugan kuwa dhawrsada.

ٱلَّذِينَ يُؤْمِنُونَ بِٱلْغَيْبِ وَيُقِيمُونَ ٱلصَّلَوٰةَ وَمِمَّا رَزَقْنَٰهُمْ يُنفِقُونَ ﴿٣﴾

3. Ee ah kuwa rumeeya waxaan la arkayn (ee xaq ah) oogana salaadda, waxaan ku arzaaqnayna wax ka bixiya.

وَٱلَّذِينَ يُؤْمِنُونَ بِمَآ أُنزِلَ إِلَيْكَ وَمَآ أُنزِلَ مِن قَبْلِكَ وَبِٱلْءَاخِرَةِ هُمْ يُوقِنُونَ ﴿٤﴾

4. Ee ah kuwa rumeeya waxa lagugu dajiyey Nabiyow, iyo wixii la dajiyey horay, aakhirana yaqiinin.

أُو۟لَٰٓئِكَ عَلَىٰ هُدًى مِّن رَّبِّهِمْ ۖ وَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْمُفْلِحُونَ ﴿٥﴾

5. Kuwaasi hanuun Alle yey ku sugan yihiin kuwaasina waa uun kuwa liibaanay.

Suuraddan waa suuradda u dheer quraanka, waxayna kulmisatay waxyaalo badan oo ah: xukunno, qisooyin, iyo wanaagyo badan, waxayna ku billaabatay xaqnimada quraanka iyo siduu hanuun ugu yahay kuwa xumaanta ka dhawrsada, ee rumeeya xaqayna arkayn sida Alleheen, malaa'igta, qiyaamada, jannada iyo naarta iyo wax kastoo xaq ah, Alle na ka yaaba hadday cid la joogaan iyo haddii kaleba. Salaaddana ooga, sakada iyo sadaqadana bixiya, quraanka iyo kutubtii horana rumeeya, kuwaasina waa kuwa hanuunay ee

liibaanay. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: haka yeelina guryihiinna qubuuro, illeen gurigii lagu akhriyo suuradda baqarah ma galo shaydaane. Waxaa wariyey imaam Muslim iyo Axmed iyo kuwo kale. Xasan Basri wuxuu yidhi: dhawrsade waa kan iska ilaaliya waxa laga reebay, gutana waxa lagu faral yeelay. **[Al-Baqarah: 1-5].**

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ سَوَآءٌ عَلَيْهِمْ
ءَأَنذَرْتَهُمْ أَمْ لَمْ تُنذِرْهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ٦

6. Kuwii gaaloobay waxaa isugu mid ah u digtayaa iyo umaadan diginaa mana rumeeyaan (xaqa).

خَتَمَ ٱللَّهُ عَلَىٰ قُلُوبِهِمْ وَعَلَىٰ سَمْعِهِمْ ۖ
وَعَلَىٰٓ أَبْصَٰرِهِمْ غِشَٰوَةٌ ۖ وَلَهُمْ عَذَابٌ
عَظِيمٌ ٧

7. Alle ayaa daabacay quluubtooda iyo maqalkooda. Araggoodana wuxuu yeeley dabool waxaana u sugnaaday cadaab weyn.

وَمِنَ ٱلنَّاسِ مَن يَقُولُ ءَامَنَّا بِٱللَّهِ
وَبِٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ وَمَا هُم بِمُؤْمِنِينَ ٨

8. Dadka waxaa ka mid ah kuwo dhihi waxaan rumeynay Alle iyo maalintii dambaysay (qiyaamada) haddana aan mu'miniin ahayn.

يُخَٰدِعُونَ ٱللَّهَ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَمَا
يَخْدَعُونَ إِلَّآ أَنفُسَهُمْ وَمَا يَشْعُرُونَ ٩

9. Waxay khiyaameyn Alle iyo kuwa (xaqa) rumeeyey mase khiyaamaynayaan waxaan naftooda ahayn mase kasayaan.

فِى قُلُوبِهِم مَّرَضٌ فَزَادَهُمُ ٱللَّهُ
مَرَضًا ۖ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌۢ بِمَا كَانُوا۟
يَكْذِبُونَ ١٠

10. Quluubtay ka bukaan markaasaa Alle u siyaadiyay cudurro waxayna mudan cadaab daran beentoodii darteed.

وَإِذَا قِيلَ لَهُمْ لَا تُفْسِدُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ
قَالُوٓا۟ إِنَّمَا نَحْنُ مُصْلِحُونَ ١١

11. Marka lagu dhoho ha fasaadinina dhulka waxay dhahaan annagu waxaan uun nahay hagaajiyayaal.

أَلَآ إِنَّهُمْ هُمُ ٱلْمُفْسِدُونَ وَلَٰكِن لَّا
يَشْعُرُونَ ١٢

12. Iyaga unbaa fasaadiyayaal ah hasa yeeshee ma kasayaan.

Suuraddu waxay xagga hore kaga hadashay mu'miniinta iyo xaqay ku sugan yihiin, haddana waxay ka hadashay gaalada iyo sida loo daboolay qalbigooda,

maqalkooda iyo indhahoodaba iyo in xumaan u sugnaatay. Mar saddexaadna waxay ka hadashay munaafiqiinta iyo warkooda beenta ah iyo siday isugu dayayeen inay Alle iyo mu'miniinta khayaameeyaan, iyadoy dhabtu tahay inay naftooda khiyaamayn qalbigana ka bukaan una sii kordhi, marka xumaanta laga reebana ey sheegtaan inay wax wanaajin, dhab ahaanna iyaga unbaa xumaan wadayaal ah mase oga. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: waxaa lay faray inaan la dagaallamo dadka intay ka dhahaan macbuud xaq lugu caabudaa ma jiro Allaah mooyee, hadday dhahaanna way iga ilaaliyeen dhiiggooda iyo xoolahoodaba waxaan xaqeeda ahayn, xisaabtoodana Alle ayaa leh, waynaaye. Waxaa wariyay labadii sheekh (Bukhaari iyo Muslim). **[Al-Baqarah: 6-12].**

وَإِذَا قِيلَ لَهُمْ ءَامِنُواْ كَمَآ ءَامَنَ ٱلنَّاسُ قَالُوٓاْ أَنُؤْمِنُ كَمَآ ءَامَنَ ٱلسُّفَهَآءُۗ أَلَآ إِنَّهُمْ هُمُ ٱلسُّفَهَآءُ وَلَٰكِن لَّا يَعْلَمُونَ ﴿١٣﴾

13. Marka lagu dhaho rumeeya sida dadku u rumeeyey waxay dhihi ma waxaannu u rumayn sida sufahada (caqli gaabka), waxaase sufaha ah iyaga uun laakiin ma oga.

وَإِذَا لَقُواْ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ قَالُوٓاْ ءَامَنَّا وَإِذَا خَلَوْاْ إِلَىٰ شَيَٰطِينِهِمْ قَالُوٓاْ إِنَّا مَعَكُمْ إِنَّمَا نَحْنُ مُسْتَهْزِءُونَ ﴿١٤﴾

14. Markay la kulmaan kuwa rumeeyey (xaqa) waxay dhihi waan rumaynay, markay la kaliyoobaan shaydaammadoodana waxay dhahaan annagu waan idinla jirraa, ee waxaan ahayn uun kuwa ku jees jeesa (mu'miniinta).

ٱللَّهُ يَسْتَهْزِئُ بِهِمْ وَيَمُدُّهُمْ فِى طُغْيَٰنِهِمْ يَعْمَهُونَ ﴿١٥﴾

15. Allaa ku jeesjeesi iyaga (si xaq ah oo booskeedi dhacday) wuxuuna u siyaadin kibirkooda iyo baadidooda, iyagoo ku dhex wareeri.

أُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ ٱشْتَرَوُاْ ٱلضَّلَٰلَةَ بِٱلْهُدَىٰ فَمَا رَبِحَت تِّجَٰرَتُهُمْ وَمَا كَانُواْ مُهْتَدِينَ ﴿١٦﴾

16. Kuwaasi waxay ku gateen baadida hanuunka, mana ribxin (faa'iidin) ganacsigoodu, mana hanuuunsana.

مَثَلُهُمْ كَمَثَلِ ٱلَّذِى ٱسْتَوْقَدَ نَارًا فَلَمَّآ أَضَآءَتْ مَا حَوْلَهُۥ ذَهَبَ ٱللَّهُ بِنُورِهِمْ وَتَرَكَهُمْ فِى ظُلُمَٰتٍ لَّا يُبْصِرُونَ ﴿١٧﴾

17. Waxay la mid yihiin mid huriyey dab, markuu iftiimiyay gaararkiisana Alle la tagay nuurkoodii ugagana tagay mugdi ayan wax arkayn.

Xumaanlow iyo munaafiq marka la waaniyo oo wanaagga la faro wuxuu ku jawaabaa xumaan iyo madax adayg isagoo dhihi ma waxaan wax u rumayn siday mu'miniinta caqliga yar wax u rumeeyeen, dhabtuse waa in isagu caqli gaab yahay, shayaadiinta ay wax isku qastaanna wax u tarayn ee xumaan uun u siyaadi, waana kuwo wanaagga nacay oo baadi doortay, kuna khasaaray ganacsigii, nuurkii iyo iftiinkiina ka fogaada oo mugdi, iyo qas ku dhex dabaalan. Ibnu Cabbaas iyo Mujaahid waxay sheegeen in shaydaamadoodu yihiin gaalada hoggaamisa ee yuhuud iyo mushrikiin ah. **[Al-Baqarah: 13-17].**

صُمٌّۢ بُكۡمٌ عُمۡيٞ فَهُمۡ لَا يَرۡجِعُونَ ١٨

18. Waa dhaga la'aan, hadal la'aan, arag la'aan, xaqana uma soo noqdaan.

أَوۡ كَصَيِّبٖ مِّنَ ٱلسَّمَآءِ فِيهِ ظُلُمَٰتٞ وَرَعۡدٞ وَبَرۡقٞ يَجۡعَلُونَ أَصَٰبِعَهُمۡ فِيٓ ءَاذَانِهِم مِّنَ ٱلصَّوَٰعِقِ حَذَرَ ٱلۡمَوۡتِۚ وَٱللَّهُ مُحِيطُۢ بِٱلۡكَٰفِرِينَ ١٩

19. Wuxuu la mid yahay xaalkoodu sidii roob samada ka soo degay oo mugdiyo onkod iyo hillaac leh, oy gelinayaan farahooda dhagahooda hanqadhka (danabka) owgiis geeri ka digtooni darteed, Alle na waa koobay gaalo.

يَكَادُ ٱلۡبَرۡقُ يَخۡطَفُ أَبۡصَٰرَهُمۡۖ كُلَّمَآ أَضَآءَ لَهُم مَّشَوۡاْ فِيهِ وَإِذَآ أَظۡلَمَ عَلَيۡهِمۡ قَامُواْۚ وَلَوۡ شَآءَ ٱللَّهُ لَذَهَبَ بِسَمۡعِهِمۡ وَأَبۡصَٰرِهِمۡۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَيۡءٖ قَدِيرٞ ٢٠

20. Wuxuu u dhaw yahay hillaacu (iftiinka xaqu) inuu dafo araggooda, markastoos u ifo way ku socdaan, markuu ku mugdiyoobana waa ay joogsadaan, haddii Alle doonana wuxuu la tagaa maqalkooda iyo araggooda, Alle na wax walba waa karaa.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ ٱعۡبُدُواْ رَبَّكُمُ ٱلَّذِي خَلَقَكُمۡ وَٱلَّذِينَ مِن قَبۡلِكُمۡ لَعَلَّكُمۡ تَتَّقُونَ ٢١

21. Dadow caabuda Allehiinna idin abuuray idinka iyo kuwii idinka horreeyey, waxaadna mudataan inaad dhowrsataan

ٱلَّذِى جَعَلَ لَكُمُ ٱلْأَرْضَ فِرَٰشًا وَٱلسَّمَآءَ بِنَآءً وَأَنزَلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَأَخْرَجَ بِهِۦ مِنَ ٱلثَّمَرَٰتِ رِزْقًا لَّكُمْ ۖ فَلَا تَجْعَلُوا۟ لِلَّهِ أَندَادًا وَأَنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿٢٢﴾

22. Allaha dhulka idiin ka yeelay gogol, samadana dhismo, idiinkanasoo dajiyey samada biyo, kuna soo bixiyey midho si laydiinku arzuqo ee ha u yeelina Alle kuwa la mid ah idinkoo og.

Alle wuxuu sheegay in aanay gaaladu xaqa maqal, arag iyo af la'dahay oy la mid yihiin cid roob hanqadh iyo hillaac badan ku da'ayo waqti mugdi ah oo cabsi iyo argagax ku sugan, taasina waxay tusaale u tahay siday u wareersan tahay gaaladu oy xaqa uga sii jeeddo, waxaase ku habboon dadka in ay caabudaan Allaha u nicmeeyey, wax walbana abuuray. **[Al-Baqarah: 18-22].**

وَإِن كُنتُمْ فِى رَيْبٍ مِّمَّا نَزَّلْنَا عَلَىٰ عَبْدِنَا فَأْتُوا۟ بِسُورَةٍ مِّن مِّثْلِهِۦ وَٱدْعُوا۟ شُهَدَآءَكُم مِّن دُونِ ٱللَّهِ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٢٣﴾

23. Haddaad shakisan tihiin waxaan ku dejinnay addoonkannaga (Nabiga) keena suurad la mid ah, una yeedha markhaatiyadiinna (kaalmeeyayaashiinna) ee Alle ka soo hadhay haddaad runlowyo tihiin.

فَإِن لَّمْ تَفْعَلُوا۟ وَلَن تَفْعَلُوا۟ فَٱتَّقُوا۟ ٱلنَّارَ ٱلَّتِى وَقُودُهَا ٱلنَّاسُ وَٱلْحِجَارَةُ ۖ أُعِدَّتْ لِلْكَٰفِرِينَ ﴿٢٤﴾

24. Haddaydaan falin mana falaysaane ka dhawrsada naar lagu shido dadka iyo dhagaxa, loona darbay gaalada.

وَبَشِّرِ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ أَنَّ لَهُمْ جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ ۖ كُلَّمَا رُزِقُوا۟ مِنْهَا مِن ثَمَرَةٍ رِّزْقًا قَالُوا۟ هَٰذَا ٱلَّذِى رُزِقْنَا مِن قَبْلُ ۖ وَأُتُوا۟ بِهِۦ مُتَشَٰبِهًا ۖ وَلَهُمْ فِيهَآ أَزْوَٰجٌ مُّطَهَّرَةٌ ۖ وَهُمْ فِيهَا خَٰلِدُونَ ﴿٢٥﴾

25. Ugu bishaaree kuwa rumeeyey (xaqa) camal fiicanna falay inay mudan jannooyin ay socoto dhexdeeda wabiyaalkii, mar kastoo laga arzaaqo xaggeeda midho waxay dhahaan kani waa kii horay naloogu arzuqay, waxaa la siiyey isagoo isu eg (aragga) waxayna dhexdeeda ku leeyihiin haween (janno) oo nadiif ah, dhexdeedana way ku waari.

Kitaabka quraanka ah waa kitaab wayn oo wanaaggu ku dhan yahay. Xugun, amar, reebid, akhlaaq, qisas, tusaale iyo wax kastoo loo baahan yahay. Saas darteed yaa Alle cajis galiyey gaalada in ay la yimaadaan wax la mid ah quraanka, cidday rabaanna la kaashadaan, mar haddayse ka noogeen oyna weligoodna keeni karin ha ka dhowrsadeen naftooda naar daran oo gaal loo darbay. Mu'miniinta xaqa rumeeyey ee wanaagga fashayna waxay mudan jannooyin wanaag ku dhan yahay oo wanaaggeeda iyo midhaheedu isu eg yihiin xagga aragga. Ibnu Mascuud waxaa laga wariyey inuu yidhi: haddaad maqashaan Alle oo ku leh quraanka kuwa xaqa rumeeyow aad u dhagaysta waa khayr uu fari ama shar uu reebi. **[Al-Baqarah: 23-25].**

26. Alle kama xishoodo (reebtoonaado) inuu tusaale u yeelo kaneeco iyo wax ka sarreeyaba, kuwa (xaqa) rumeeyeyse waxay og yihiin inuu xaq yahay (quraanku) kana yimid xagga Allahood, kuwa gaaloobayse waxay dhihi muxuu Alle ula jeedaa tusaalahan, wuxuu ku dhumin Alle in badan wuxuuna ku hanuunin in badan, waxaan faasiqiin ahaynna kuma dhumiyo.

* إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَسْتَحْيِۦٓ أَن يَضْرِبَ
مَثَلًا مَّا بَعُوضَةً فَمَا فَوْقَهَا ۚ فَأَمَّا ٱلَّذِينَ
ءَامَنُوا۟ فَيَعْلَمُونَ أَنَّهُ ٱلْحَقُّ مِن رَّبِّهِمْ ۖ
وَأَمَّا ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ فَيَقُولُونَ مَاذَآ
أَرَادَ ٱللَّهُ بِهَٰذَا مَثَلًا ۘ يُضِلُّ بِهِۦ كَثِيرًا
وَيَهْدِى بِهِۦ كَثِيرًا ۚ وَمَا يُضِلُّ بِهِۦٓ إِلَّا
ٱلْفَٰسِقِينَ ﴿٢٦﴾

27. Ee ah kuwa buriya ballanka Alle intay adkeeyeen ka dib, oo gooya wuxuu faray Alle in la xidhiidhiyo oo fasaadiya dhulka kuwaasu waa kuwa khasaaray.

ٱلَّذِينَ يَنقُضُونَ عَهْدَ ٱللَّهِ مِنۢ بَعْدِ
مِيثَٰقِهِۦ وَيَقْطَعُونَ مَآ أَمَرَ ٱللَّهُ بِهِۦٓ أَن
يُوصَلَ وَيُفْسِدُونَ فِى ٱلْأَرْضِ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ
هُمُ ٱلْخَٰسِرُونَ ﴿٢٧﴾

28. Seed uga gaaloobaysaan Alle idinkoo ahaa waxaan noolayn, markaas Alle idin nooleeyey haddana idin dili haddana idin soo noolayn ka dibna xaggiisa laydiin celin.

كَيْفَ تَكْفُرُونَ بِٱللَّهِ وَكُنتُمْ أَمْوَٰتًا
فَأَحْيَٰكُمْ ۖ ثُمَّ يُمِيتُكُمْ ثُمَّ يُحْيِيكُمْ
ثُمَّ إِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿٢٨﴾

Markay gaaladii dheheen maxaa looga jeedaa caarada iyo daqsiga lagu sheegay quraanka yaa Alle soo dajiyey aayaddan, Alle na xaqa cadayntiisa waxba uma daayo, mu'minkase wax walboo xaqa wuu rumeeyaa waxaase ku dhumi faasiqiinta; ballankana buriya, gooyana wixii Alle faray in la xidhiidhiyo dhulkana fasaadin, waana kuwa khasaaray, mana habboona in laga gaaloobo Allaha wax dila waxna nooleeya, xaggiisana loo noqon. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: wixii khasaara ah oo Alle ku sheego waxaan islaamka ahayn waa gaalnimo, wixii khasaara ah oos ku sheego dadka islaamkana waa dambi. **[Al-Baqarah: 26-28].**

هُوَ ٱلَّذِى خَلَقَ لَكُم مَّا فِى ٱلْأَرْضِ جَمِيعًا ثُمَّ ٱسْتَوَىٰٓ إِلَى ٱلسَّمَآءِ فَسَوَّىٰهُنَّ سَبْعَ سَمَٰوَٰتٍ ۚ وَهُوَ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمٌ ﴿٢٩﴾

29. Alle waa kan idiin abuuray waxa dhulka ku sugan dhammaan, markaas samada u kor noqday kana dhigay todobo samo, eebbana wax walba waa og yahay.

وَإِذْ قَالَ رَبُّكَ لِلْمَلَٰٓئِكَةِ إِنِّى جَاعِلٌ فِى ٱلْأَرْضِ خَلِيفَةً ۖ قَالُوٓا۟ أَتَجْعَلُ فِيهَا مَن يُفْسِدُ فِيهَا وَيَسْفِكُ ٱلدِّمَآءَ وَنَحْنُ نُسَبِّحُ بِحَمْدِكَ وَنُقَدِّسُ لَكَ ۖ قَالَ إِنِّىٓ أَعْلَمُ مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿٣٠﴾

30. Xus markuu ku yidhi Allehaa malaa'igta waxaan yeeli dhulka cid u hadha, oyna dheheen ma waxaad yeeli dhexdeeda cid fasaadisa oo ku daadisa dhiig annagoo ku nasahayna oo mahaddaada ku dheehan, oo ku wayneynayna, markaasuu yidhi anigu waxaan ogahay waxaydaan ogayn.

وَعَلَّمَ ءَادَمَ ٱلْأَسْمَآءَ كُلَّهَا ثُمَّ عَرَضَهُمْ عَلَى ٱلْمَلَٰٓئِكَةِ فَقَالَ أَنۢبِـُٔونِى بِأَسْمَآءِ هَٰٓؤُلَآءِ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٣١﴾

31. Alle wuxuu baray Nabi Aadam magacyada dhammaan, markaasuu u bandhigay Alle malaa'igta kuna yidhi: iiga warrama magacyada kuwaas haddaad runlow tihiin.

قَالُوا۟ سُبْحَٰنَكَ لَا عِلْمَ لَنَآ إِلَّا مَا عَلَّمْتَنَا ۖ إِنَّكَ أَنتَ ٱلْعَلِيمُ ٱلْحَكِيمُ ﴿٣٢﴾

32. Waxayna dheheen nasahnidaada Allow, cilmi malihin waxaad na barto mooyee, waxaad tahay adigu wax oge falsan.

قَالَ يَـٰٓـَٔادَمُ أَنۢبِئْهُم بِأَسْمَآئِهِمْ ۖ فَلَمَّآ أَنۢبَأَهُم بِأَسْمَآئِهِمْ قَالَ أَلَمْ أَقُل لَّكُمْ إِنِّىٓ أَعْلَمُ غَيْبَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَأَعْلَمُ مَا تُبْدُونَ وَمَا كُنتُمْ تَكْتُمُونَ ﴿٣٣﴾

33. Wuxuuna yidhi Alle: Aadamow uga warran magacyadooda, markuu magacyadooda uga warramay yuu yidhi Alle miyaanan idin ku dhihin anigu waxaan ogahay waxa ku maqan samooyinka iyo dhulka, iyo inaan ogahay waxaad muujinaysaan iyo waxaad qarsanaysaan.

Dhulka waxa ku sugan Alle wuxuu u abuuray dadka, waana inay ku mahdiyaan si ficanna ugu dul noolaadaan dhulka, Alle waa kan imtixaamay malaa'igta una sheegay inuu dhulka yeeli cid dagta oo khaliif ka noqota. Markay la yaabeen oo sheegeen inay ka yaabi inay dhulka fasahaadiyaan yaa Alle Nabi Aadam abuuray oo faray inuu sheego wax malaa'igtu garan weyday oo magacyo ah, taasna waxay ku tusin in Alle uun wax walba og yahay, wax qarsoon, wax muuqda iyo wax la muujiyaba. **[Al-Baqarah: 29-33].**

وَإِذْ قُلْنَا لِلْمَلَـٰٓئِكَةِ ٱسْجُدُوا۟ لِـَٔادَمَ فَسَجَدُوٓا۟ إِلَّآ إِبْلِيسَ أَبَىٰ وَٱسْتَكْبَرَ وَكَانَ مِنَ ٱلْكَـٰفِرِينَ ﴿٣٤﴾

34. Xus markaan ku nidhi malaa'igay u sujuuda Aadam, markaasay sujuudeen ibliis mooyee, wuu diiday wuuna is kibriyay, waxuuna ka mid noqday gaalada.

وَقُلْنَا يَـٰٓـَٔادَمُ ٱسْكُنْ أَنتَ وَزَوْجُكَ ٱلْجَنَّةَ وَكُلَا مِنْهَا رَغَدًا حَيْثُ شِئْتُمَا وَلَا تَقْرَبَا هَـٰذِهِ ٱلشَّجَرَةَ فَتَكُونَا مِنَ ٱلظَّـٰلِمِينَ ﴿٣٥﴾

35. Waxaana nidhi Aadamow dag adiga iyo haweenaydaadu jannada, kana cuna xaggeeda (cunno) shifo oo wasac ah meeshaad doontaan hana u dhawaannina geeddan oo markaas aad ka mid noqotaan daalimiinta.

فَأَزَلَّهُمَا ٱلشَّيْطَـٰنُ عَنْهَا فَأَخْرَجَهُمَا مِمَّا كَانَا فِيهِ ۖ وَقُلْنَا ٱهْبِطُوا۟ بَعْضُكُمْ لِبَعْضٍ عَدُوٌّ ۖ وَلَكُمْ فِى ٱلْأَرْضِ مُسْتَقَرٌّ وَمَتَـٰعٌ إِلَىٰ حِينٍ ﴿٣٦﴾

36. Waxaana ka fogeeyey jannada xaggeeda shaydaan wuxuuna ka bixiyey waxay ku sugnaayeen, waxaana ku nidhi ka hoobta jannada, qaarkiinna qaarka kale

iyadoo col uu u yahay, waxaana dhulka idiinku sugnaaday meel aad ku nagaataan iyo raaxo tan iyo waqti.

37. Waxuuna kala kulmay Aadam xagga Alle kalimooyin, wuuna ka toobad aqbalay, Allana waa toobad aqbal badane waana naxariiste.

فَتَلَقَّىٰٓ ءَادَمُ مِن رَّبِّهِۦ كَلِمَٰتٍ فَتَابَ عَلَيْهِۚ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلتَّوَّابُ ٱلرَّحِيمُ ﴿٣٧﴾

Aayadahan waxay ka warrami sida Alle u sharrifay Nabi Aadam iyo caruurtiisa, malaa'igtana u faray inay u sujuudaan, hase yeeshee Ibliis baa diiday, isna kibriyey, gaaloobayna, Nabi Aadamna wuxuu ku noolaa jannada isaga iyo haweenaydiisii intuu ibliis ka waswaasiyo geeddiina cunaan, markaas Alle ka saaray jannada, isagooy ku noolaan dhulka iyagoo col isu ah. Alle waa ka toobad aqbalay Aadam markuu u toobad keenay. Taasina waxay muujin xumaanta Ibliis iyo inay waajib tahay in xumaanloo dhan laga digtoonaado, lagana fogaado isaga iyo xumaantiisa. **[Al-Baqarah: 34-37].**

38. Waxaan ku nidhi ka hoobta xaggeeda dhammaantiin, hadduu idiinka yimaaddo xaggayga hanuun ruuxii raaca hanuunka cabsi korkiisa ma ahaato iyo murug midna.

قُلْنَا ٱهْبِطُوا۟ مِنْهَا جَمِيعًاۖ فَإِمَّا يَأْتِيَنَّكُم مِّنِّى هُدًى فَمَن تَبِعَ هُدَاىَ فَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿٣٨﴾

39. Kuwa gaaloobayse oo beeniyey aayaadkannaga, kuwaasu waa ehelu naar dhexdeedana way ku waari.

وَٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَكَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَآ أُو۟لَٰٓئِكَ أَصْحَٰبُ ٱلنَّارِۖ هُمْ فِيهَا خَٰلِدُونَ ﴿٣٩﴾

40. Bini israa'iilow xusa nicmadayda aan idiinku nicmeeyey, oofiyana ballankaygii aan oofiyo ballankiinna, aniga uunna iga cabsada.

يَٰبَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ٱذْكُرُوا۟ نِعْمَتِىَ ٱلَّتِىٓ أَنْعَمْتُ عَلَيْكُمْ وَأَوْفُوا۟ بِعَهْدِىٓ أُوفِ بِعَهْدِكُمْ وَإِيَّٰىَ فَٱرْهَبُونِ ﴿٤٠﴾

41. Rumeeyana waxaan dejiyey isagoo rumayn waxaad haysataan, hana noqonnina mid ka gaaloobay quraanka

وَءَامِنُوا۟ بِمَآ أَنزَلْتُ مُصَدِّقًا لِّمَا مَعَكُمْ وَلَا تَكُونُوٓا۟ أَوَّلَ كَافِرٍۭ بِهِۦۖ وَلَا تَشْتَرُوا۟ بِـَٔايَٰتِى ثَمَنًا قَلِيلًا وَإِيَّٰىَ فَٱتَّقُونِ ﴿٤١﴾

kii ugu horreeyay, hana ku gadannina aayaadkayga qiimo yar (adduunka) aniga uun iga dhawrsada.

42. Hana ku khaldina xaqa baadilka, ood qarisaan xaqa idinkoo og.

وَلَا تَلْبِسُواْ ٱلْحَقَّ بِٱلْبَٰطِلِ وَتَكْتُمُواْ ٱلْحَقَّ وَأَنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿٤٢﴾

43. Ooga salaadda, bixiyana sakada, lana rukuuca kuwa rukuuca (tukada).

وَأَقِيمُواْ ٱلصَّلَوٰةَ وَءَاتُواْ ٱلزَّكَوٰةَ وَٱرْكَعُواْ مَعَ ٱلرَّٰكِعِينَ ﴿٤٣﴾

Aayadahan waxay sheegi in dadka markuu u yimaaddo hanuun iyo Nabiyo ruuxii raaca uusan cabsi iyo murug midna arkayn. Ciddii ka gaalowdana oo beenisa aayaadka Alle uu ku waari naarta. Aayadaha kalena waxay ka qisoon reer binii israa'iil iyo siduu ballan adag uga qaaday una nicmeeyey ayna waajib tahay inay ka cabsadaan, iyo inay rumeeyaan xaqa Alle soo dajiyey, ayna noqonnin quraanka kuwa ugu horreeya ee ka gaaloobo, xaqana ayna ku gadannin wax yar, xaqa iyo baadilkana ayan isku khaldin, xaqoyna qarinnin iyagoo og. Salaadda iyo sakadana gutaan, lana tukadaan mu'miniinta tukan. Rasuulkuna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): ruuxii cilmi in dar Alle loo barto ahayd u barta uun adduunyo ku hel ma uriyo udugga jannada. Waxaa wariyey Abuu Daa'uud. **[Al-Baqarah: 38-43].**

44. Ma waxaad faraysaan dadka wanaagga ood halmaansan tihiin naftiinna idinkoo akhrin kitaabka miyeydaan wax kasayn.

۞ أَتَأْمُرُونَ ٱلنَّاسَ بِٱلْبِرِّ وَتَنسَوْنَ أَنفُسَكُمْ وَأَنتُمْ تَتْلُونَ ٱلْكِتَٰبَ ۚ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿٤٤﴾

45. Kaalmaysta samirka iyo salaadda wayna ku wayn tahay salaaddu (ku culus tahay) kuwa khushuuca mooyee.

وَٱسْتَعِينُواْ بِٱلصَّبْرِ وَٱلصَّلَوٰةِ ۚ وَإِنَّهَا لَكَبِيرَةٌ إِلَّا عَلَى ٱلْخَٰشِعِينَ ﴿٤٥﴾

46. Kuwa citiqaadsan inay la kulmi Allahood xaggiisana loo celin.

ٱلَّذِينَ يَظُنُّونَ أَنَّهُم مُّلَٰقُواْ رَبِّهِمْ وَأَنَّهُمْ إِلَيْهِ رَٰجِعُونَ ﴿٤٦﴾

47. Bini'israa'iilow xusa nicmadeydii aan idiinku nicmeeyey, iyo inaan idinka fadilay caalamkii (markaas).

يَٰبَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ٱذْكُرُواْ نِعْمَتِىَ ٱلَّتِىٓ أَنْعَمْتُ عَلَيْكُمْ وَأَنِّى فَضَّلْتُكُمْ عَلَى ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٤٧﴾

48. Kana dhawrsada maalin aanay nafi ka deeqeyn naf (kale) waxba, aan lagana aqbalayn shafeeco lagana qaadayn (oggalayn) furasho loona gargaarayn.

وَٱتَّقُواْ يَوۡمٗا لَّا تَجۡزِي نَفۡسٌ عَن نَّفۡسٖ شَيۡـٔٗا وَلَا يُقۡبَلُ مِنۡهَا شَفَٰعَةٞ وَلَا يُؤۡخَذُ مِنۡهَا عَدۡلٞ وَلَا هُمۡ يُنصَرُونَ ٤٨

49. Xusa markaan idinka korinnay fircoon iyo colkiisii ee idin dhadhansiin jiray cadaab daran, ayna gawrici jireen wiilashiinna ayna dayn jireen gabdhihiinna, taasina waxaa ku sugan imtixaam wayn oo Allihiin.

وَإِذۡ نَجَّيۡنَٰكُم مِّنۡ ءَالِ فِرۡعَوۡنَ يَسُومُونَكُمۡ سُوٓءَ ٱلۡعَذَابِ يُذَبِّحُونَ أَبۡنَآءَكُمۡ وَيَسۡتَحۡيُونَ نِسَآءَكُمۡۚ وَفِي ذَٰلِكُم بَلَآءٞ مِّن رَّبِّكُمۡ عَظِيمٞ ٤٩

50. Xusa markaan idiin dhanballay badda oon idin korinnay oona maanshaynay Fircoon iyo colkiisii idinkoo eegaya.

وَإِذۡ فَرَقۡنَا بِكُمُ ٱلۡبَحۡرَ فَأَنجَيۡنَٰكُمۡ وَأَغۡرَقۡنَآ ءَالَ فِرۡعَوۡنَ وَأَنتُمۡ تَنظُرُونَ ٥٠

Aayadda hore wuxuu Alle ku caddeeyay ehelu kitaabka taasoo uu u sheegay inayan habboonayn inay dadka wanaagga faraan naftoodana halmaansan yihiin iyagoo kitaabka tawreed akhrin, ruux wax kasina uma habboona, markaasuu Alle faray addoommadiisa inay kaalmaystaan samir iyo salaad, umana fududa salaaddu mu'mininta mooyee, haddana rumaysan inay Alle la kulmi una noqon. Waana in laga dhawrsadaa dhibka maalinta qiyaame ee cidna cid kale wax u tarayn wax furasha ahna aan laga aqbalayn, markaasaa Alle u sheegay bini israa'iil wuxuu ugu nicmeeyey iyo siduu uga nabadgaliyey Fircoon iyo colkiisii. Nabigu wuxuu yidhi: caalimka dadka khayrka fara oonse ku camal falayn wuxuu la mid yahay siraad isgubi. Dhabaraani ayaa weriyay **[Al-Baqarah: 44-50].**

51. Xusa markaan u yaboohnay (Nabi) Muuse afartan habeen, markaas aad yeelateen dibi (aad caabuddeen) gadaashiis idinkoo daalimiin ah.

وَإِذۡ وَٰعَدۡنَا مُوسَىٰٓ أَرۡبَعِينَ لَيۡلَةٗ ثُمَّ ٱتَّخَذۡتُمُ ٱلۡعِجۡلَ مِنۢ بَعۡدِهِۦ وَأَنتُمۡ ظَٰلِمُونَ ٥١

52. Markaas aan idin saamaxnay arrintaas ka dib si aad u mahdisaan.

ثُمَّ عَفَوۡنَا عَنكُم مِّنۢ بَعۡدِ ذَٰلِكَ لَعَلَّكُمۡ تَشۡكُرُونَ ٥٢

53. Xusa markaan siinnay (Nabi) Muuse kitaab iyo kala bixiye (xaqa iyo baadilka) si aad u hanuuntaan.

وَإِذْ ءَاتَيْنَا مُوسَى ٱلْكِتَٰبَ وَٱلْفُرْقَانَ لَعَلَّكُمْ تَهْتَدُونَ ﴿٥٣﴾

54. Xusa markuu (Nabi) Muuse ku yidhi qoonkiisa qoonkayow waxaad dulmideen naftiinna yeelashadiinnii dibiga (aad caabuddeen) ee u toobad keena Allihiinna , dilana naftiinna, saasaa idinku khayr badan Allihiin agtiis, markaasuu idinka toobad aqbalay, maxaa yeelay Alle waa toobad aqbal badane naxariista.

وَإِذْ قَالَ مُوسَىٰ لِقَوْمِهِۦ يَٰقَوْمِ إِنَّكُمْ ظَلَمْتُمْ أَنفُسَكُم بِٱتِّخَاذِكُمُ ٱلْعِجْلَ فَتُوبُوٓاْ إِلَىٰ بَارِئِكُمْ فَٱقْتُلُوٓاْ أَنفُسَكُمْ ذَٰلِكُمْ خَيْرٌ لَّكُمْ عِندَ بَارِئِكُمْ فَتَابَ عَلَيْكُمْ ۚ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلتَّوَّابُ ٱلرَّحِيمُ ﴿٥٤﴾

55. Xusa markaad dhahdeen muusow kuma rumaynayno intaan ka aragno Alle si caddaan ah, markaasay idin qabatay qaylo ama naar idinkoo eegi.

وَإِذْ قُلْتُمْ يَٰمُوسَىٰ لَن نُّؤْمِنَ لَكَ حَتَّىٰ نَرَى ٱللَّهَ جَهْرَةً فَأَخَذَتْكُمُ ٱلصَّٰعِقَةُ وَأَنتُمْ تَنظُرُونَ ﴿٥٥﴾

56. Markaasaan idin soo bixinnay geeridiinnii ka dib si aad u mahadisaan.

ثُمَّ بَعَثْنَٰكُم مِّنۢ بَعْدِ مَوْتِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿٥٦﴾

Wuxuu Alle ku sheegay halkan nimcooyin badan oo uu ku mannaystay, sida yaboohii tawreed iyo siismadii, saamaxaaddii, toobad aqbalid, hase yeeshee waxay caabudeen dibi naftoodiina way dulmiyeen, waxayna sheegeen inayan xaqa rumeyneyn intay uga arkaan Alle si caddaan ah, hase yeeshee waxaa lagu riday qaylo waana la soo bixiyey intey dhinteen, taasina waxay ku tusin madax adeyga banii'israa'iil iyo abaal kadarkooda. **[Al-Baqarah: 51-56].**

57. Waxaan idinku hadhaynay daruur, waxaan idinku soo dajinnay macaan iyo hilib (shimbireed) waxaana idinku nidhi wax ka cuna wanaaggaan idiinku arzaaqnay, mana ayan na dulmin, laakiin waxay ahaayeen naftooda uun kuwa dulmiya.

وَظَلَّلْنَا عَلَيْكُمُ ٱلْغَمَامَ وَأَنزَلْنَا عَلَيْكُمُ ٱلْمَنَّ وَٱلسَّلْوَىٰ ۖ كُلُوا۟ مِن طَيِّبَٰتِ مَا رَزَقْنَٰكُمْ ۚ وَمَا ظَلَمُونَا وَلَٰكِن كَانُوٓا۟ أَنفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ ﴿٥٧﴾

58. Xusa markaan nidhi gala magaaladan oo ka cuna xaggeeda meeshaad doontaan cunid barwaaqa ah. Kana gala iridda idinkoo sujuudsan, dhahana (Allow) hoobi (danbi), aan idiin dhaafno gafafkiinnee. Waxaan u siyaadinaynaa samafalayaasha (wanaag).

وَإِذْ قُلْنَا ٱدْخُلُوا۟ هَٰذِهِ ٱلْقَرْيَةَ فَكُلُوا۟ مِنْهَا حَيْثُ شِئْتُمْ رَغَدًا وَٱدْخُلُوا۟ ٱلْبَابَ سُجَّدًا وَقُولُوا۟ حِطَّةٌ نَّغْفِرْ لَكُمْ خَطَٰيَٰكُمْ ۚ وَسَنَزِيدُ ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿٥٨﴾

59. Markaasay ku badaleen kuwii dulmi falay hadalkii loo yidhi mid aan ahayn, markaasaan kaga soo dajinnay kuwii dulmiga falay cadaab samada faasiqnimadoodii ay falayeen darteed.

فَبَدَّلَ ٱلَّذِينَ ظَلَمُوا۟ قَوْلًا غَيْرَ ٱلَّذِى قِيلَ لَهُمْ فَأَنزَلْنَا عَلَى ٱلَّذِينَ ظَلَمُوا۟ رِجْزًا مِّنَ ٱلسَّمَآءِ بِمَا كَانُوا۟ يَفْسُقُونَ ﴿٥٩﴾

60. Xusa markuu (Nabi) Muuse u roobdoonay qoomkiisa markaasaan ku nidhi ku garaac ushaada dhagaxa, waxaana ka dillaacay xaggiisa labo iyo toban ilood, wuuna ogaaday ruuxkasto (koox kasta) meeshay ka cabbi lahayd, waxaan ku nidhi ka cuna oo ka cabba rizqiga Alle dhulkana fasaad ha ku xumeynina.

* وَإِذِ ٱسْتَسْقَىٰ مُوسَىٰ لِقَوْمِهِۦ فَقُلْنَا ٱضْرِب بِّعَصَاكَ ٱلْحَجَرَ ۖ فَٱنفَجَرَتْ مِنْهُ ٱثْنَتَا عَشْرَةَ عَيْنًا ۖ قَدْ عَلِمَ كُلُّ أُنَاسٍ مَّشْرَبَهُمْ ۖ كُلُوا۟ وَٱشْرَبُوا۟ مِن رِّزْقِ ٱللَّهِ وَلَا تَعْثَوْا۟ فِى ٱلْأَرْضِ مُفْسِدِينَ ﴿٦٠﴾

Sidoo kale wuxuu Alle ku mannaystay binii israa'iil nicmooyin kale sida hadhayn, macaan, hilib xalaal ah iyo rizqiga Alle ee kale, wayse dulmifaleen ooy diideen wixii la faray, kuna badaleen wanaaggii xumaan, markaasaa Alle ciqaabay xumaantooda darteed (Nabi) Muusana waa kii u roobdoonay Alle na u dillaaciyey ilo laba iyo toban ah si ay uga cabbaan. Wuxuuna faray inayan fasaadinnin dhulka. Wuxuuna Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) sheegay in loo yidhi bani israa'iil ka gala albaabka oo dhaha dambi hoobin waxayse galeen iyagoo gurguuran oo dhihi: xabbad ku jirta tin. Bukhaari yaa ka wariyey Abuuhureyre. **[Al-Baqarah: 57-60].**

61. Xusa markaad dhahdeen muusow kuma samrayno cunno kaliya ee noo bari Allehaa ha noo soo bixiyo waxa dhulku soo dhaliyo, oo ah cagaarkeeda la cuno, xinidh, toon, cadas iyo basal, wuxuuna ku yidhi ma waxaad ku beddalanaysaan wax xun kii khayrka badnaa, u (hoobta) daga masar waxaad helaysaan waxaad warsateen, waxaana lagu qadaray dulli iyo miskiinnimo, waxayna la noqdeen cadho Alle, arrintaasna waxaa ugu wacan inay yihiin kuwo ka gaalooba aayaadka Alle, dilayeenna Nabiyada xaq la'aan, taasina waa caasinnimadooda darteed iyo xadgudubkoodii.

وَإِذْ قُلْتُمْ يَٰمُوسَىٰ لَن نَّصْبِرَ عَلَىٰ
طَعَامٍ وَٰحِدٍ فَٱدْعُ لَنَا رَبَّكَ يُخْرِجْ
لَنَا مِمَّا تُنۢبِتُ ٱلْأَرْضُ مِنۢ بَقْلِهَا
وَقِثَّآئِهَا وَفُومِهَا وَعَدَسِهَا وَبَصَلِهَا ۖ
قَالَ أَتَسْتَبْدِلُونَ ٱلَّذِى هُوَ أَدْنَىٰ بِٱلَّذِى
هُوَ خَيْرٌ ۚ ٱهْبِطُوا۟ مِصْرًا فَإِنَّ لَكُم
مَّا سَأَلْتُمْ ۗ وَضُرِبَتْ عَلَيْهِمُ ٱلذِّلَّةُ
وَٱلْمَسْكَنَةُ وَبَآءُو بِغَضَبٍ مِّنَ ٱللَّهِ ۚ
ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ كَانُوا۟ يَكْفُرُونَ بِـَٔايَٰتِ
ٱللَّهِ وَيَقْتُلُونَ ٱلنَّبِيِّـۧنَ بِغَيْرِ ٱلْحَقِّ ۚ ذَٰلِكَ
بِمَا عَصَوا۟ وَّكَانُوا۟ يَعْتَدُونَ ﴿٦١﴾

62. Kuwii rumeeyey iyo kuwii yuhuudda ahaa iyo nasaarada iyo saabi'iinta ciddii rumeysa Alle iyo maalintii dambe oo camal suubanna falay waxay ku leeyihiin Alle agtiisa ajir, cabsina korkooda ma noqoto mana tiiraanyoodaan.

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَٱلَّذِينَ هَادُوا۟
وَٱلنَّصَٰرَىٰ وَٱلصَّٰبِـِٔينَ مَنْ ءَامَنَ بِٱللَّهِ
وَٱلْيَوْمِ ٱلْـَٔاخِرِ وَعَمِلَ صَٰلِحًا فَلَهُمْ
أَجْرُهُمْ عِندَ رَبِّهِمْ وَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ
وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿٦٢﴾

Waxaa ka mid ah madax adaygga iyo xumaan jacaylka bani israa'iil inay (Nabi) Muuse u sheegeen inayan ku samrayn cunno kaliya ee la siiyo toon, basal, bagal, iyo wax la mid ah, markaasaa Alle ku canaantay arrintaas, farayna inay masar aadaan waxay codsadeenna la siiyo dulli miskiinnimana waa lagu qaddaray, cadho Alle na way la noqdeen, gaalnimadooda, dilidda Nabiyada xaq darro, caasinnimadaa iyo xad gudubkooda dartiis, ruuxiise xaqa rumeeya oo Alle, Rasuulkiisa, malaa'igta iyo qiyaame qira, camal fiicanna fala, ama muslin ha ahaado ama yuhuud islaantay, ama nassara islaantay, ama saabi'iin islaamtay ajrina way heli cabsi iyo murug midna ma arkaan, mar haday xaqa si dhab ah u raaceen. Waxaana la sheegay inay aayaddu ku soo degtay markuu Salmaan Alfaarisi wax warsaday Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee). **[Al-Baqarah: 61-62].**

وَإِذْ أَخَذْنَا مِيثَٰقَكُمْ وَرَفَعْنَا فَوْقَكُمُ
ٱلطُّورَ خُذُوا۟ مَآ ءَاتَيْنَٰكُم بِقُوَّةٍ
وَٱذْكُرُوا۟ مَا فِيهِ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ ﴿٦٣﴾

63. Xusa markaan idinka qaadnay ballan (adag) oo korkiinna yeellay (buurta) Dhuur oon idinku nidhi ku qaata waxaan idin siinnay niyad adag, xusuustana waxa ku sugan, si aad u dhawrsataan.

ثُمَّ تَوَلَّيْتُم مِّنۢ بَعْدِ ذَٰلِكَ ۖ فَلَوْلَا فَضْلُ
ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَتُهُۥ لَكُنتُم مِّنَ
ٱلْخَٰسِرِينَ ﴿٦٤﴾

64. Markaasaad jeedsateen intaas ka dib, hadduusan jirin fadliga Alle ee korkiinna iyo naxariistiisa waxaad ahaan lahaydeen kuwa khasaaray.

وَلَقَدْ عَلِمْتُمُ ٱلَّذِينَ ٱعْتَدَوْا۟ مِنكُمْ
فِى ٱلسَّبْتِ فَقُلْنَا لَهُمْ كُونُوا۟ قِرَدَةً
خَٰسِـِٔينَ ﴿٦٥﴾

65. Dhab ahaan baad u og tihiin kuwii xad gudbay sabtida, oo idinka mid ah, markaasaan ku nidhi noqda daanyeerro la fageeyo (oo dullaysan).

فَجَعَلْنَٰهَا نَكَٰلًا لِّمَا بَيْنَ يَدَيْهَا وَمَا
خَلْفَهَا وَمَوْعِظَةً لِّلْمُتَّقِينَ ﴿٦٦﴾

66. Waxaanna ka yeellay ciqaabtaas waanada waxa ka horreeya iyo wax ka danbeeyaba, iyo waano kuwa dhowrsada.

وَإِذْ قَالَ مُوسَىٰ لِقَوْمِهِۦٓ إِنَّ ٱللَّهَ
يَأْمُرُكُمْ أَن تَذْبَحُوا۟ بَقَرَةً ۖ قَالُوٓا۟
أَتَتَّخِذُنَا هُزُوًا ۖ قَالَ أَعُوذُ بِٱللَّهِ أَنْ
أَكُونَ مِنَ ٱلْجَٰهِلِينَ ﴿٦٧﴾

67. Xusa markuu ku (yidhi) (Nabi) Muuse qoomkiisa: Alle wuxuu idin fari inaad gawracdaan sac, waxayna dheheen miyaad nagu jees jeesi, wuxuuna yidhi waxaan ka magan gali Alle inaan ka mid noqdo jaahiliinta.

Alle wuxuu ka qaaday banii israa'iil ballan adag, wuxuu korkooda yeelay buurta Dhuur, uuna faray inay ku guddoomaan kitaabka Alle siiyay niyad adag ooyna ku waantoobaan waxa ku sugan, wayse jeedsadeen intaas ka dib, waxayna noqdeen kuwa khasaara haddaan Alle naxariisan, maalinta sabtida ah oo la faray inay qadariyaanna way xadgudbeen, markaasaa Alle ku yidhi noqda daanyeer dullaysan, si loogu waano qaato, looguna dhawrsado. Mar kalaa Alle imtixaanay markuu (Nabi) Muuse faray inay gawracaan sac, taasoo

Alle amray waxayse dhaheen sidoodii xumayd waad nagu ciyaari, Nabi Muuse wuxuu yidhi waxaan ka magangalay Alle inaan ka mid noqdo jaahiliinta dadka ku dheeldheesha. Xaalkuna wuxuu ku saabsanaa si loo soo saaro nin oy iska dileen oon lana ogayn ciddii dishay. **[Al-Baqarah: 63-67].**

قَالُواْ ٱدۡعُ لَنَا رَبَّكَ يُبَيِّن لَّنَا مَا هِيَۚ قَالَ إِنَّهُۥ يَقُولُ إِنَّهَا بَقَرَةٞ لَّا فَارِضٞ وَلَا بِكۡرٌ عَوَانُۢ بَيۡنَ ذَٰلِكَۖ فَٱفۡعَلُواْ مَا تُؤۡمَرُونَ ٦٨

68. Waxayna dhaheen noo bari Allehaa ha noo caddeeyo waxay tahaye, wuxuuna yidhi Alle wuxuu leeyahay waa sac oon duq ahayn yaraynna, oo u dhaxaysa taas (labadaas) ee fala waxa laydin fari.

قَالُواْ ٱدۡعُ لَنَا رَبَّكَ يُبَيِّن لَّنَا مَا لَوۡنُهَاۚ قَالَ إِنَّهُۥ يَقُولُ إِنَّهَا بَقَرَةٞ صَفۡرَآءُ فَاقِعٞ لَّوۡنُهَا تَسُرُّ ٱلنَّٰظِرِينَ ٦٩

69. Waxay dhaheen noo bari Allehaa ha noo caddeeyo midabkeeda, wuxuuna yidhi Alle wuxuu leeyahay waa sac boora ah, boorannimadeed daran tahay, oo ka farxin (cajabin) kuwa eegi.

قَالُواْ ٱدۡعُ لَنَا رَبَّكَ يُبَيِّن لَّنَا مَا هِيَ إِنَّ ٱلۡبَقَرَ تَشَٰبَهَ عَلَيۡنَا وَإِنَّآ إِن شَآءَ ٱللَّهُ لَمُهۡتَدُونَ ٧٠

70. Waxay dhaheen noo bari Allehaa ha noo caddeeyo waxay tahay, maxaa yeelay waxaa is kaga kanna shabbahday (isu ekaatay) lo'dee, hadduu Alle donnana waan toosaynaa.

قَالَ إِنَّهُۥ يَقُولُ إِنَّهَا بَقَرَةٞ لَّا ذَلُولٞ تُثِيرُ ٱلۡأَرۡضَ وَلَا تَسۡقِي ٱلۡحَرۡثَ مُسَلَّمَةٞ لَّا شِيَةَ فِيهَاۚ قَالُواْ ٱلۡـَٰٔنَ جِئۡتَ بِٱلۡحَقِّۚ فَذَبَحُوهَا وَمَا كَادُواْ يَفۡعَلُونَ ٧١

71. Wuxuu yidhi: Alle wuxuu leeyahay waa sac aan laylanayn oon qodayn dhulka, oon waraabinaynna beerta, wayna ka nabad gashan tahay (ceeb), midab kalana ma leh, waxay dheheen haddaad la timid dhabta, markaasay gawraceen sicii, waxayna u dhawaadeen inayna falin.

Aayadahan waxay ka warrami banii israa'iil iyo madax adayggooda iyo siday isugu dhibeen sici gawraca la yidhi, ay warsadeen da'deeda, midabkeeda, tilmaanteedaba, taasina waxay ku tusin ciddii wax isku adkeeya isagoo fudud in lagu dhibi siduu yidhi Ibnu Cabbaas: hadday qaadan lahaayeen saca ugu yar way ku fillaan lahayd, laakiin way isku adkeeyeen, markaasaa lagu adkeeyey. **[Al-Baqarah: 68-71].**

وَإِذْ قَتَلْتُمْ نَفْسًا فَٱدَّٰرَٰٔتُمْ فِيهَا ۖ وَٱللَّهُ مُخْرِجٌ مَّا كُنتُمْ تَكْتُمُونَ ﴿٧٢﴾

72. Xusa markaad disheen naf ood isku khilaafteen Alle na wuu soo bixin (muujin) waxaad qarineyseen.

فَقُلْنَا ٱضْرِبُوهُ بِبَعْضِهَا ۚ كَذَٰلِكَ يُحْىِ ٱللَّهُ ٱلْمَوْتَىٰ وَيُرِيكُمْ ءَايَٰتِهِۦ لَعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ ﴿٧٣﴾

73. Waxaan ku nidhi ku garaaca kan la dilay saca qaarkiis, saasuuna u nooleeyaa Alle wixii dhintay, idiinna tusin aayaadkiisa si aad wax u kastaan.

ثُمَّ قَسَتْ قُلُوبُكُم مِّنۢ بَعْدِ ذَٰلِكَ فَهِىَ كَٱلْحِجَارَةِ أَوْ أَشَدُّ قَسْوَةً ۚ وَإِنَّ مِنَ ٱلْحِجَارَةِ لَمَا يَتَفَجَّرُ مِنْهُ ٱلْأَنْهَٰرُ ۚ وَإِنَّ مِنْهَا لَمَا يَشَّقَّقُ فَيَخْرُجُ مِنْهُ ٱلْمَآءُ ۚ وَإِنَّ مِنْهَا لَمَا يَهْبِطُ مِنْ خَشْيَةِ ٱللَّهِ ۗ وَمَا ٱللَّهُ بِغَٰفِلٍ عَمَّا تَعْمَلُونَ ﴿٧٤﴾

74. Markaasay ingagtay quluubtiinnu intaas ka dib, waxayna la mid tahay dhagax, ama waa ka daran tahay ingeegga, dhagaxyada waxaa ka mid ah kuway ka burqadaan wabiyaal, waxaana ka mid ah kuwo dildillaaca oo ay ka soo baxaan biyo, waxaana ka mid ah kuwo hooban cabsida Alle darteed, Alle na ma halmaansana waxaad camal falaysaan.

Saan horay u soo sheegnay waxay iska dileen bani israa'iil ruux, markaasaa la faray inay gawracaan sac si loo baadho ciddii wax dishay, hasa yeeshee ay isku khilaafeen iskuna dhibeen, Alle na wuu muujiyey waxay qarinayeen, waxaana Alle faray in wax ka mida saca lagu garaaco maydkii la dilay si uu u noolaado, Alle na waa karaa inuu nooleeyo wixii dhintay sida ruuxaas la dilay ee la soo nooleeyay, waxaase ingagtay quluubtoodii sida dhagaxa, ama ka daran, illeen dhagaxa waxaa ka mid ah mid wabiyaal ka dillaacaan iyo mid la dillaaca oo biyo ka yimaadaan iyo mid la hoobta cabsi Alle, wax walbana Alle waa og yahay

mana halmaamo. In dhagax Alle ka cabsadana la yaab ma leh, maxaa yeeley tasarrufka adduunka Alle ayaa iska leh, waxna ma daaliyo, Nabigana (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: waxaan garan dhagax ku yiil maka oo i salaami jiray intaan lay bixinnin. Waxaa wariyey imaam Muslim. **[Al-Baqarah: 72-74].**

75. Ma waxaad damcaysaan mu'miniintaay inay rumeeyaan yuhuudduu xaqa oy (idin raacaan) iyagoo koox ka mid ahi ay maqlayaan hadalka Alle (towreed) haddana ay xarrifaan (leexiyaan) intay kaseen kadib, iyagoo og (inay gafsan yihiin).

أَفَتَطْمَعُونَ أَن يُؤْمِنُوا۟ لَكُمْ وَقَدْ كَانَ فَرِيقٌ مِّنْهُمْ يَسْمَعُونَ كَلَٰمَ ٱللَّهِ ثُمَّ يُحَرِّفُونَهُۥ مِنۢ بَعْدِ مَا عَقَلُوهُ وَهُمْ يَعْلَمُونَ ﴿٧٥﴾

76. Markay la kulmaan kuwii rumeeyey (xaqana) waxay dhahaan waan rumaynay, markuu qaarkood qaarka kale la kaliyoobana waxay dhahaan ma waxaad uga sheekaynaysaan (u qireeysaan) mu'miniinta, waxa Alle idiin furay (oo xaqnimada Nabiga Muxamed ah) si ay idiin kula doodaan Alle agtiisa miyaydaan wax kasayn.

وَإِذَا لَقُوا۟ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ قَالُوٓا۟ ءَامَنَّا وَإِذَا خَلَا بَعْضُهُمْ إِلَىٰ بَعْضٍ قَالُوٓا۟ أَتُحَدِّثُونَهُم بِمَا فَتَحَ ٱللَّهُ عَلَيْكُمْ لِيُحَآجُّوكُم بِهِۦ عِندَ رَبِّكُمْ ۚ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿٧٦﴾

77. Miyayna ogayn in Alle og yahay waxay qarsan iyo waxay muujin.

أَوَلَا يَعْلَمُونَ أَنَّ ٱللَّهَ يَعْلَمُ مَا يُسِرُّونَ وَمَا يُعْلِنُونَ ﴿٧٧﴾

78. Waxaa ka mid ah ehelu kitaabka kuwo aan wax qorayn waxna akhriyeyn, oon aqooninna kitaab (towreed) hasa yeeshee rumayn yididiilo, waxaan malo ahaynna kuma socdaan.

وَمِنْهُمْ أُمِّيُّونَ لَا يَعْلَمُونَ ٱلْكِتَٰبَ إِلَّآ أَمَانِىَّ وَإِنْ هُمْ إِلَّا يَظُنُّونَ ﴿٧٨﴾

79. Halaag wuxuu u sugnaaday kuwa ku qoraya kitaabka (towreed) gacmahooda hadana dhihi kani

فَوَيْلٌ لِّلَّذِينَ يَكْتُبُونَ ٱلْكِتَٰبَ بِأَيْدِيهِمْ ثُمَّ يَقُولُونَ هَٰذَا مِنْ عِندِ ٱللَّهِ

لِيَشْتَرُوا۟ بِهِۦ ثَمَنًا قَلِيلًا ۖ فَوَيْلٌ لَّهُم مِّمَّا كَتَبَتْ أَيْدِيهِمْ وَوَيْلٌ لَّهُم مِّمَّا يَكْسِبُونَ ﴿٧٩﴾

wuxuu ka yimid xagga Alle si ay qiimo yar ugu gataan, halaag baana ugu sugnaaday waxay qori gacmahoodu, halaag baana ugu suganaaday waxay kasban.

Markuu Alle soo sheegay madax adaygga yuhuudda iyo siday u fulin waayeen amarka Alle, iyo muran badnidooda iyo xaqdiidnimadooda wuxuu raaciyay ceebahooda iyo dambiyadooda badan, sida rumeyn la'aanta xaqa, leexinta macnaha kitaabka, qarinta xaqnimada Nabiga, jaahilnimada qaarkood, yididiilo been ah ku noolida, badalaadda kitaabka iyo ka ganacsiga xaqa iyo xumaanno kale oo badan. Allaah se wuu og yahay wuuna arkaa wuuna ka abaalmarin, waxaana u sugnaaday jab iyo halaag. Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: yuhuuddu markay mu'miniinta la kulmaan waxay dhihi jireen waa Nabi idinku gaar ah, markay isla kali yoobaanna waxay dhihi sow kaad qirsanaydeen ma aha. **[Al-Baqarah: 75-79].**

وَقَالُوا۟ لَن تَمَسَّنَا ٱلنَّارُ إِلَّآ أَيَّامًا مَّعْدُودَةً ۚ قُلْ أَتَّخَذْتُمْ عِندَ ٱللَّهِ عَهْدًا فَلَن يُخْلِفَ ٱللَّهُ عَهْدَهُۥٓ ۖ أَمْ تَقُولُونَ عَلَى ٱللَّهِ مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿٨٠﴾

80. Waxay dhaheen yuhuud nama taabanayso naaru waxaan ayaamo tirsan ahayn, waxaad dhahdaa ma ballan baad ka qaadateen Alle agtiisa oosan idinkaga baxayn Alle ballankiisa. Mise waxaad ku sheegaysaan waxaydaan ogayn.

بَلَىٰ مَن كَسَبَ سَيِّئَةً وَأَحَٰطَتْ بِهِۦ خَطِيٓـَٔتُهُۥ فَأُو۟لَٰٓئِكَ أَصْحَٰبُ ٱلنَّارِ ۖ هُمْ فِيهَا خَٰلِدُونَ ﴿٨١﴾

81. Saas ma aha ee ruuxii kasbada xumaan oo uu koobo gafkiisu ciddaasi waa asaxaabta naarta, wayna ku waari dhexdeeda.

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ أُو۟لَٰٓئِكَ أَصْحَٰبُ ٱلْجَنَّةِ ۖ هُمْ فِيهَا خَٰلِدُونَ ﴿٨٢﴾

82. Kuwa rumeeyey (xaqase) oo camal wanaagsan sameeya kuwaasi waa asaxaabta jannada wayna ku waari dhexdeeda.

وَإِذْ أَخَذْنَا مِيثَٰقَ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ لَا تَعْبُدُونَ إِلَّا ٱللَّهَ وَبِٱلْوَٰلِدَيْنِ إِحْسَانًا وَذِى ٱلْقُرْبَىٰ وَٱلْيَتَٰمَىٰ وَٱلْمَسَٰكِينِ

83. Xusa markaan ka qaadnay banii israa'iil ballan inaydaan caabudin Alle mooyee, iyo inay u sama falaan labada waalid iyo

وَقُولُواْ لِلنَّاسِ حُسۡنٗا وَأَقِيمُواْ ٱلصَّلَوٰةَ وَءَاتُواْ ٱلزَّكَوٰةَ ثُمَّ تَوَلَّيۡتُمۡ إِلَّا قَلِيلٗا مِّنكُمۡ وَأَنتُم مُّعۡرِضُونَ ﴿٨٣﴾

qaraabada, agoonta, masaakiinta iyo inay u dhahaan wanaag dadka, salaaddana oogaan bixiyaanna sakada, markaasaad jeesateen in yar oo idinka mid ah mooyee, idinkoo jeedsan.

Alle wuxuu buriyay sheegashadi yuhuudda ee ah inaan naaru taabanayn muddo yaroo tirsan mooyee oo ah ayaamahay caabudeen dibiga, wuuse ku beeniyey Alle una caddeeyey inayan wax ballan ah Alle ka qaadin ee ay ku hadli wax been ah ooyana u cilmi lahayn, ciddiise xumaan kasbata dambigeeduna koobo waxay noqon naarta ehelkeeda, kuna waari, mu'miniinta xaqa rumeeyeyse wanaaggana fala waxay gali kuna waari jannada, wuxuuna Alle caddeeyey ahmiyadda Alle kaliya oo la caabudo, iyo in loo sama falo: waalidka, qaraabada, agoonta, masaakiinta, hadal wanaagsan oo loo dhaho dadka, iyo salaadda iyo sakada oo la guto, hase yeeshee gaalo way ka jeedsatay. Cabdullaahi ibnu Mascuud waxaa laga wariyay inuu yidhi: Rasuulka Allow camalkee u fiican? Wuxuuna yidhi: salaadda oo waqtigeeda la guto, maxaa ku xiga? Labada waalid oo loo samo falo, haddana maxaa ku xiga? Wuxuu yidhi: jidka Alle oo lagu jahaado. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim. **[Al-Baqarah: 80-83].**

وَإِذۡ أَخَذۡنَا مِيثَٰقَكُمۡ لَا تَسۡفِكُونَ دِمَآءَكُمۡ وَلَا تُخۡرِجُونَ أَنفُسَكُم مِّن دِيَٰرِكُمۡ ثُمَّ أَقۡرَرۡتُمۡ وَأَنتُمۡ تَشۡهَدُونَ ﴿٨٤﴾

84. Xusa markaan idinka qaadnay ballan (adag) inaydaan iska daadin dhiig (inaydaan isdilin) aydaan qaarkiin (qaarka kale) guryihiinna ka bixinnin, markaasaad aqoonsateen arrintaas idinkoo marag furi.

ثُمَّ أَنتُمۡ هَٰٓؤُلَآءِ تَقۡتُلُونَ أَنفُسَكُمۡ وَتُخۡرِجُونَ فَرِيقٗا مِّنكُم مِّن دِيَٰرِهِمۡ تَظَٰهَرُونَ عَلَيۡهِم بِٱلۡإِثۡمِ وَٱلۡعُدۡوَٰنِ وَإِن يَأۡتُوكُمۡ أُسَٰرَىٰ تُفَٰدُوهُمۡ وَهُوَ مُحَرَّمٌ عَلَيۡكُمۡ إِخۡرَاجُهُمۡۚ أَفَتُؤۡمِنُونَ بِبَعۡضِ ٱلۡكِتَٰبِ وَتَكۡفُرُونَ بِبَعۡضٖۚ فَمَا جَزَآءُ مَن يَفۡعَلُ ذَٰلِكَ مِنكُمۡ إِلَّا خِزۡيٞ فِي ٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَاۖ وَيَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِ

85. Haddana waxaad ahaateen kuwo dili naftooda, oo ka erya kooxo idinka mid ah guryahooda, idinkoo isugu kaalmayn korkooda dambi iyo colnimo, haddii la qafaashana waad furanaysaan, iyadooy dhabtu tahay inay xaaraan idinka tahay bixintoodu, miyaad rumaynaysaan kitaabka qaarkiis, kana gaaloobaysaan

qaar, ruuxii saas fala oo idinka mid ah abaalkiisu ma aha dulli adduun iyo maalinta qiyaame oo loo celin cadaab daran mooyee, Alle na ma halmaamayo waxaad falaysaan.

يُرَدُّونَ إِلَىٰٓ أَشَدِّ ٱلْعَذَابِ ۗ وَمَا ٱللَّهُ بِغَٰفِلٍ عَمَّا تَعْمَلُونَ ﴿٨٥﴾

86. Kuwaasina waa kuwa ku gatay nolosha adduunyo (ee dhaw) aakhiro, lagamana fududeeyo xaggooda cadaabka loomana gargaaro.

أُو۟لَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ ٱشْتَرَوُا۟ ٱلْحَيَوٰةَ ٱلدُّنْيَا بِٱلْءَاخِرَةِ ۖ فَلَا يُخَفَّفُ عَنْهُمُ ٱلْعَذَابُ وَلَا هُمْ يُنصَرُونَ ﴿٨٦﴾

Aayadahan wuxuu Alle ku sheegay xaalkii yuhuudda joogtay waqtigii Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha yeelee) iyo wixii ballan laga qaaday inayna islaynin, hase yeeshee ay khilaafeen isna laayeen isna bixiyeen, haddii qaar la qafaashana oy furan jireen, taasina waa kitaabka qaarkiis oo la rumeeyay qaarna laga gaaloobay, ciddii saas fashana waa kuwa adduunyada ku gatay aakhiro, cadaab daranna way mudan qiyaamada, aayaduhuna waxay canaanan ruux kasta oon xaqa suu yahay ugu dhaqmin, ama yuhuud ha ahaato ama cid kale. **[Al-Baqarah: 84-86].**

87. Dhab ahaan yaan u siinnay (Nabi) Muuse kitaabka, waxaanna raacinnay gadaashiis rasuullo, waxaanna siinnay (Nabi) Ciise ibnu Maryama mucjizaad cad cad, waxaanna ku xoojinnay ruux daahir ah (Jibriil) mar kastoose idiinla yimaaddo rasuul waxaan naftiinnu jeclayn (xaqa) ma is kibrisaan, koox waad beenisaan, kooxna waa dishaan.

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا مُوسَى ٱلْكِتَٰبَ وَقَفَّيْنَا مِنۢ بَعْدِهِۦ بِٱلرُّسُلِ ۖ وَءَاتَيْنَا عِيسَى ٱبْنَ مَرْيَمَ ٱلْبَيِّنَٰتِ وَأَيَّدْنَٰهُ بِرُوحِ ٱلْقُدُسِ ۗ أَفَكُلَّمَا جَآءَكُمْ رَسُولٌۢ بِمَا لَا تَهْوَىٰٓ أَنفُسُكُمُ ٱسْتَكْبَرْتُمْ فَفَرِيقًا كَذَّبْتُمْ وَفَرِيقًا تَقْتُلُونَ ﴿٨٧﴾

88. Waxayna dheheen yuhuud quluubtannadu waxay ku sugan tahay dabool, saas ma aha ee waa la nacladay gaalnimadooda darteed wax yar bay rumeeyn.

وَقَالُوا۟ قُلُوبُنَا غُلْفٌۢ ۚ بَل لَّعَنَهُمُ ٱللَّهُ بِكُفْرِهِمْ فَقَلِيلًا مَّا يُؤْمِنُونَ ﴿٨٨﴾

89. Markuu uga yimid yuhuud kitaab xagga Alle isagoo rumeyn waxa agtooda ah (tawreed) horayna u ahaayeen kuwa ka rajeeya soo bixinta Nabi Maxamad inay kaga gargaarsadaan kuwii gaaloobay, markuu yimid waxay garanayeen way ka gaaloobeen Nabiga, naclad korkooda ha ahaato gaaladee.

وَلَمَّا جَآءَهُمْ كِتَٰبٌ مِّنْ عِندِ ٱللَّهِ مُصَدِّقٌ لِّمَا مَعَهُمْ وَكَانُوا۟ مِن قَبْلُ يَسْتَفْتِحُونَ عَلَى ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ فَلَمَّا جَآءَهُم مَّا عَرَفُوا۟ كَفَرُوا۟ بِهِۦ ۚ فَلَعْنَةُ ٱللَّهِ عَلَى ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٨٩﴾

Yuhuudu hadal qalloocan iyo xumaan ma waydo, halkanna markii xaqu u yimid quraanka iyo Nabiga yey sheegteen inay qalbiga ka daboolan yihiin, markaasuu Alle nacladay, maxaa yeelay wax yar bay rumeyn, wayna yaqiiniyeen Nabiga iyagoo ku dhihi jiray gaalada kale waxaa la soo bixin Nabi intaan la safanno naloo gargaari, wax lala yaabana ma aha in Alle soo diro Nabi siduu Nabiyo badanba u bixiyey. Xudayfe waxaa laga wariyey: quluubtu waa afar, waxaana ka mid ah qalbi daboolan oo loo cadhooday waana qalbiga gaalka, waxaa wariyey Ibnu abii Shayba iyo ibnu abidunyaa kitaabkiisa "ikhlaas". **[Al-Baqarah: 87-89].**

90. Waxaa u xun waxay ku gataan naftooda inay ka gaaloobeen xaqa Alle soo dajiyey xasad dartiis, ku soo dajinta Alle fadligiisa cidduu doono, oo addoommadiisa ka mid ah, waxayna la noqdeen cadho cadho kale lagu kordhiyey, gaalana waxaa u sugnaaday cadaab wax dulleeya.

بِئْسَمَا ٱشْتَرَوْا۟ بِهِۦٓ أَنفُسَهُمْ أَن يَكْفُرُوا۟ بِمَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ بَغْيًا أَن يُنَزِّلَ ٱللَّهُ مِن فَضْلِهِۦ عَلَىٰ مَن يَشَآءُ مِنْ عِبَادِهِۦ ۖ فَبَآءُو بِغَضَبٍ عَلَىٰ غَضَبٍ ۚ وَلِلْكَٰفِرِينَ عَذَابٌ مُّهِينٌ ﴿٩٠﴾

91. Marka lagu yidhaah yuhuudda rumeeya waxa Alle soo dajiyey waxay dhahaan waxaannu rumeeyn waxa nalagu soo dejiyey, wayna ka gaaloobaan waxa ka dambeeyey, isagoo xaq ah oo rumeyn waxa agtooda ah, waxaad dhahdaa maxaad ugu

وَإِذَا قِيلَ لَهُمْ ءَامِنُوا۟ بِمَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ قَالُوا۟ نُؤْمِنُ بِمَآ أُنزِلَ عَلَيْنَا وَيَكْفُرُونَ بِمَا وَرَآءَهُۥ وَهُوَ ٱلْحَقُّ مُصَدِّقًا لِّمَا مَعَهُمْ ۗ قُلْ فَلِمَ تَقْتُلُونَ أَنۢبِيَآءَ ٱللَّهِ مِن قَبْلُ إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ﴿٩١﴾

disheen Nabiyada Alle horay haddaad mu'miniin tihiin.

92. Dhab ahaan yuu idiin la yimid (Nabi) Muuse mucjisooyin, markaasaad ka yeelateen dibi (macbuud) isaga kadib idinkoo daalimiin ah.

* وَلَقَدْ جَآءَكُم مُّوسَىٰ بِٱلْبَيِّنَٰتِ ثُمَّ ٱتَّخَذْتُمُ ٱلْعِجْلَ مِنۢ بَعْدِهِۦ وَأَنتُمْ ظَٰلِمُونَ ﴿٩٢﴾

Ganacsi waxaa u xun xaqoo la naco oo xumaan la raaco, isagoo xasad iyo dulmi ku madax taagi sida yuhuuddii Nabiga diidday, kuwaasoo marka la faro inay quraanka iyo Nabiga raacaan sheegi inay rumayn tawreed wixii ka dambeeyeyna ay ka gaaloobi, inkastoos xaq yahay u rumeynna tawreed, waase beentood yuhuuddu, maxaa yeelay waxay layn jireen Nabiyadii hore, dibina way caabudeen iyagoo daalimiin ah. Abul Caaliya wuxuu yidhi: cadhada hore waxay ku dhacday markay beeniyeen Nabi Ciise iyo kitaabkii injiil, tan kalana markay beeniyeen Nabi Muxamed (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) iyo quraanka. **[Al-Baqarah: 90-92].**

93. Xusa markaan idinka qaadnay ballan, korkiinnana yeellay (buurta dhuur) oon idinku nidhi ku qaata waxaan idin siinay xoog (niyad adag) maqlana (xaqa) waxayna dheheen waan maqallay waana caasinnay, waxaana laga waraabiyey quluubtooda (jacaylkii) dibiga (ay caabudeen) gaalnimadooda darteed, waxaad dhahdaa waxaa xumaan badan wuxuu idin farayo iimaankiinnu haddaad mu'uminiin tihiin.

وَإِذْ أَخَذْنَا مِيثَٰقَكُمْ وَرَفَعْنَا فَوْقَكُمُ ٱلطُّورَ خُذُوا۟ مَآ ءَاتَيْنَٰكُم بِقُوَّةٍ وَٱسْمَعُوا۟ ۖ قَالُوا۟ سَمِعْنَا وَعَصَيْنَا وَأُشْرِبُوا۟ فِى قُلُوبِهِمُ ٱلْعِجْلَ بِكُفْرِهِمْ ۚ قُلْ بِئْسَمَا يَأْمُرُكُم بِهِۦٓ إِيمَٰنُكُمْ إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ﴿٩٣﴾

94. Waxaad dhahdaa hadday daarta aakhiro idinka uun idiin sugnaatay dadka kale ka sokow jeclaada geeri haddaad run sheegaysaan.

قُلْ إِن كَانَتْ لَكُمُ ٱلدَّارُ ٱلْءَاخِرَةُ عِندَ ٱللَّهِ خَالِصَةً مِّن دُونِ ٱلنَّاسِ فَتَمَنَّوُا۟ ٱلْمَوْتَ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٩٤﴾

95. Mana jeclaanayaan (geerida) waligood, waxay hor marsadeen gacmahoodu darteed, Alle na waa og yahay daalimiinta.

وَلَن يَتَمَنَّوْهُ أَبَدًۢا بِمَا قَدَّمَتْ أَيْدِيهِمْ ۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌۢ بِٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٩٥﴾

96. Dhab ahaan waxaad ugu ogaan yuhuudda inay ugu dadaal badan yihiin nolosha, kuwa gaalada ah qaarkood wuxuu jecel yahay in la cimrisiiyo kun sano, cimrigaasna kama fogeeyo cadaab, Alle na waa arkaa waxay camal fali.

وَلَتَجِدَنَّهُمْ أَحْرَصَ ٱلنَّاسِ عَلَىٰ حَيَوٰةٍ وَمِنَ ٱلَّذِينَ أَشْرَكُوا۟ ۚ يَوَدُّ أَحَدُهُمْ لَوْ يُعَمَّرُ أَلْفَ سَنَةٍ وَمَا هُوَ بِمُزَحْزِحِهِۦ مِنَ ٱلْعَذَابِ أَن يُعَمَّرَ ۗ وَٱللَّهُ بَصِيرٌۢ بِمَا يَعْمَلُونَ ﴿٩٦﴾

Yuhuud waligeed way madax adkeyd, sidii horay u soo martayna waxaa korkooda la yeelay buurta Dhuur si ay u qaataan xaqa iyo kitaabkii tawreed, wayse caasiyeen oo jeclaadeen dibi caabudiddiis. Waxaasina iimaan ma aha, waxayna arrintaas ku dareen inay sheegan inay jannadu iyaga u sugnaatay, hadday taasi run tahayna waxay jeclaan lahaayeen geeri, mase jecla, wax ka naf jecella ma jiro, kun sano ruux jirana wax ugama tarto cadaab, arrintaas yuhuudda lagu sheegay iyo cidaan ka leexanba waxba isma dhaamaan, adduunyo layska daba ridana wax ma tarto. **[Al-Baqarah: 93-96].**

97. Waxaad dhahdaa ruuxii col u ah (malaku) jibriil (waa colka Alle) maxaa yeelay wuxuu ku dajiyey qalbigaaga idin Alle dartiis, isagoo rumeyn quraanka wixii ka horreeyey waana hanuunka iyo bishaarada mu'miniinta.

قُلْ مَن كَانَ عَدُوًّا لِّجِبْرِيلَ فَإِنَّهُۥ نَزَّلَهُۥ عَلَىٰ قَلْبِكَ بِإِذْنِ ٱللَّهِ مُصَدِّقًا لِّمَا بَيْنَ يَدَيْهِ وَهُدًى وَبُشْرَىٰ لِلْمُؤْمِنِينَ ﴿٩٧﴾

98. Ruuxii col Alle ah, malaa'igtiisa, rasuulladiisa, jibriil iyo miikaa'iil Alle na col buu u yahay gaalada.

مَن كَانَ عَدُوًّا لِّلَّهِ وَمَلَٰٓئِكَتِهِۦ وَرُسُلِهِۦ وَجِبْرِيلَ وَمِيكَىٰلَ فَإِنَّ ٱللَّهَ عَدُوٌّ لِّلْكَٰفِرِينَ ﴿٩٨﴾

99. Dhab ahaan yaan kuugu dajinnay aayaad cad cad kamana gaaloobo faasiq cid aan ahayn.

وَلَقَدْ أَنزَلْنَآ إِلَيْكَ ءَايَٰتٍۭ بَيِّنَٰتٍ ۖ وَمَا يَكْفُرُ بِهَآ إِلَّا ٱلْفَٰسِقُونَ ﴿٩٩﴾

100. Mar kastoy ballantamaanna yuhuuddu waxaa tuura (buriya) ballanka koox ka mid ah, saas

أَوَكُلَّمَا عَٰهَدُوا۟ عَهْدًا نَّبَذَهُۥ فَرِيقٌ مِّنْهُم ۚ بَلْ أَكْثَرُهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿١٠٠﴾

ma ahee yuhuudda badankood waxba ma rumeeyaan.

101. Markuu uga yimid rasuulku xagga Alle isagoo rumayn waxa agtooda ahna (tawreed) waxay ka tuuraan koox ka mid ah kuwii kitaabka la siiyey (culimada yuhuudda) kitaabka Alle dhabarkooda gadaashiisa, waxayna la mid yihiin iyagoon garanayn.

وَلَمَّا جَآءَهُمْ رَسُولٌ مِّنْ عِندِ ٱللَّهِ
مُصَدِّقٌ لِّمَا مَعَهُمْ نَبَذَ فَرِيقٌ مِّنَ
ٱلَّذِينَ أُوتُواْ ٱلْكِتَٰبَ كِتَٰبَ ٱللَّهِ وَرَآءَ
ظُهُورِهِمْ كَأَنَّهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٠١﴾

Aayadahani waxay soo dageen markay yuhuuddu sheegteen in malaku jibriil col u yahay, taasina waxay ku tusin madax adeyggooda iyo xaqdiidnimadooda intay kala colloobaan malagga waxyiga ku soo dajiya Nabiyada, ma waxse lala colloobaa malag idanka Alle ku soo gaadhsiiya xaqa, Alle na wuu la colloobi ciddii la colloowda malaa'igtiisa, beeniyana quraanka lagu soo dajiyey Nabiga Muxamed ah, yuhuuddana waxaa caadadooda ka mid ah inay buriyaan ballannada, beeniyaanna wixii sugi xaqnimada Nabiga Muxamed ah (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) xataa kitaabkooda tawreedba ha ahaadee. **[Al-Baqarah: 97-101].**

102. Waxay raaceen gaaladii yuhuuddu waxay shayaadiintu akhriyeysay waqtigii xukunkii Nabi Suleymaan, ma gaaloobin Nabi Suleymaan, laakiin shayaadiinta yaa gaalowday, waxayna baraan dadka sixirka, iyo wixii lagu soo dajiyey labadii malag ee baabil joogay ahaana haaruut iyo maaruut, mana baraan cidna intay uga dhahaan waxaan uun nahay fidnee ha gaaloobin, waxayna ka bartaan xaggooda wax kala geeya ninka iyo haweenaydiisa, kumana dhibaan ruuxna idinka Alle la'aantiis, waxayna bartaan dadkaasu wax dhiba oo aan

وَٱتَّبَعُواْ مَا تَتْلُواْ ٱلشَّيَٰطِينُ عَلَىٰ مُلْكِ
سُلَيْمَٰنَ ۖ وَمَا كَفَرَ سُلَيْمَٰنُ وَلَٰكِنَّ
ٱلشَّيَٰطِينَ كَفَرُواْ يُعَلِّمُونَ ٱلنَّاسَ
ٱلسِّحْرَ وَمَآ أُنزِلَ عَلَى ٱلْمَلَكَيْنِ بِبَابِلَ
هَٰرُوتَ وَمَٰرُوتَ ۚ وَمَا يُعَلِّمَانِ مِنْ أَحَدٍ
حَتَّىٰ يَقُولَآ إِنَّمَا نَحْنُ فِتْنَةٌ فَلَا تَكْفُرْ ۖ
فَيَتَعَلَّمُونَ مِنْهُمَا مَا يُفَرِّقُونَ بِهِۦ بَيْنَ
ٱلْمَرْءِ وَزَوْجِهِۦ ۚ وَمَا هُم بِضَآرِّينَ بِهِۦ مِنْ
أَحَدٍ إِلَّا بِإِذْنِ ٱللَّهِ ۚ وَيَتَعَلَّمُونَ مَا يَضُرُّهُمْ
وَلَا يَنفَعُهُمْ ۚ وَلَقَدْ عَلِمُواْ لَمَنِ ٱشْتَرَىٰهُ
مَا لَهُۥ فِى ٱلْءَاخِرَةِ مِنْ خَلَٰقٍ ۚ وَلَبِئْسَ مَا
شَرَوْاْ بِهِۦٓ أَنفُسَهُمْ ۚ لَوْ كَانُواْ يَعْلَمُونَ ﴿١٠٢﴾

anfacayn, dhab ahaan yey u ogaadeen yuhuuddu ruuxii sixir barta inuusan aakhiro nasiib ku lahayn, waxaana baas leh sixirkay naftooda ku gateen hadday wax og yihiin.

وَلَوْ أَنَّهُمْ ءَامَنُواْ وَٱتَّقَوْاْ لَمَثُوبَةٌ مِّنْ عِندِ ٱللَّهِ خَيْرٌ ۚ لَّوْ كَانُواْ يَعْلَمُونَ ﴿١٠٣﴾

103. Hadday kuwa (sixirka baran) rumeeyaan xaqa oy dhawrsadaan wanaag ku abaalmarinta Alle yaa u khayr roon hadday og yihhiin.

Yuhhuddu waxay raaceen oo ku dhaqmeen sixir intay ka jeedsadeen xaqa, iyo kitaabbadii Alle. Nabi Suleymaan xaqa kama leexan, hasa yeeshee waxaa gaaloobay shayaadiintii dadka sixirka bari jiray, sixir iyo xumaan ciddii ku dhaqanta nasiib kuma laha aakhiro, waxaana dadka u khayr roon cabsi Alle iyo rumeyntiisa, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: ruuxii u taga kaahin wax sheegaha ama sixirre u rumeeya wuxuu sheegi, wuxuu ka gaaloobay wixii lagu soo dajiyey Nabiga Muxamad ah. Waxaa wariyey Nasaa'i. **[Al-Baqarah: 102-103].**

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تَقُولُواْ رَٰعِنَا وَقُولُواْ ٱنظُرْنَا وَٱسْمَعُواْ ۗ وَلِلْكَـٰفِرِينَ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١٠٤﴾

104. Kuwa xaqa rumeeyow ha dhihina na ilaali ee dhaha na sug, maqlana, gaalana waxaa u sugnaaday cadaab daran.

مَّا يَوَدُّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ مِنْ أَهْلِ ٱلْكِتَـٰبِ وَلَا ٱلْمُشْرِكِينَ أَن يُنَزَّلَ عَلَيْكُم مِّنْ خَيْرٍ مِّن رَّبِّكُمْ ۚ وَٱللَّهُ يَخْتَصُّ بِرَحْمَتِهِۦ مَن يَشَآءُ ۚ وَٱللَّهُ ذُو ٱلْفَضْلِ ٱلْعَظِيمِ ﴿١٠٥﴾

105. Ma jecla kuwii gaaloobay oo ehelu kitaabka ahaa (yuhuud iyo nasaara) iyo gaaladii carbeed in laydinku soo dajiyo khayr xagga Alle ka yimid, Alle na wuxuu ku kali yeelaa naxariistiisa ruuxuu doono, Alle na fadligiisu (khayrkiisu) waa wayn yahay.

* مَا نَنسَخْ مِنْ ءَايَةٍ أَوْ نُنسِهَا نَأْتِ بِخَيْرٍ مِّنْهَآ أَوْ مِثْلِهَآ ۗ أَلَمْ تَعْلَمْ أَنَّ ٱللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿١٠٦﴾

106. Waxaan nasakhno (nasakhu waa in xukun sharci ah lugu beddelo daliil ka dambeeyey) oo aayad ah ama aan dib u

dhigno waxaan keenaynaa mid ka khayr badan ama la mid ah, miyaadan ogayn in Alle wax kasto uu karo.

107. Miyaadan ogayn in Alle leeyahay xukunka samaawaadka iyo dhulka, idinmana sugnaannin Alle ka sokow sookeeye jecel iyo gargaare midna.

أَلَمْ تَعْلَمْ أَنَّ ٱللَّهَ لَهُۥ مُلْكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۖ وَمَا لَكُم مِّن دُونِ ٱللَّهِ مِن وَلِيٍّ وَلَا نَصِيرٍ ﴿١٠٧﴾

108. Mise waxaad dooneeysaan inaad wax warsataan Rasuulkiinna sidii loo warsaday (Nabi) Muuse mar hore ruuxii ku bedasha gaalnimo iimaan wuxuu ka dhumay jidka toosan.

أَمْ تُرِيدُونَ أَن تَسْـَٔلُوا۟ رَسُولَكُمْ كَمَا سُئِلَ مُوسَىٰ مِن قَبْلُ ۗ وَمَن يَتَبَدَّلِ ٱلْكُفْرَ بِٱلْإِيمَٰنِ فَقَدْ ضَلَّ سَوَآءَ ٱلسَّبِيلِ ﴿١٠٨﴾

Diinta islaamku ma oggola in laysku shabbaho gaalada, ama xagga hadalka, ama camalka, dhaqanka iyo wax kastoo dhib u keeni shakhsiyadda muslimka, Alle na fadligiisu waa badan yahay, cidduu doono yuuna u naxariistaa, wixii xukun ah oo Alle tirana ama dib u dhigo, wuxuu Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ku soo dajin jiray mid ka khayr badan ama la mid ah, wax lala yaabana ma aha; maxaa yeelay Alle ayaa abuuray dadka isagaana og dantooda, wax walbana awooddiisay ku jirtaa, warsi iyo su'aal aan qiimo lahaynna waa baadinnimo iyo xaq ka leexasho, oo la mid ah tay yuhuuddu warsatay (Nabi) Muuse. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Alle wuxuu idinka reebay muran, xoolo hallayn iyo warsi badan oo macno darro, waxaa lagu wariyey saxiixayn. **[Al-Baqarah: 104-108].**

109. Waxay jecel yihiin in badan oo ehelu kitaab ah (yuhuud iyo nasaara) inay idiin celiyaan iimaankiinna ka dib gaalo, xasad naftooda ka yimid dartiis, intuu xaqu u caddaaday ka dib, ee iska cafiya iskana saamaxa inta Alle ka keeni amarkiisa (la dagaallankooda ama

وَدَّ كَثِيرٌ مِّنْ أَهْلِ ٱلْكِتَٰبِ لَوْ يَرُدُّونَكُم مِّنۢ بَعْدِ إِيمَٰنِكُمْ كُفَّارًا حَسَدًا مِّنْ عِندِ أَنفُسِهِم مِّنۢ بَعْدِ مَا تَبَيَّنَ لَهُمُ ٱلْحَقُّ ۖ فَٱعْفُوا۟ وَٱصْفَحُوا۟ حَتَّىٰ يَأْتِىَ ٱللَّهُ بِأَمْرِهِۦٓ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿١٠٩﴾

islaamkooda) Alle na wax kasta wuu karaa.

وَأَقِيمُواْ ٱلصَّلَوٰةَ وَءَاتُواْ ٱلزَّكَوٰةَۚ وَمَا تُقَدِّمُواْ لِأَنفُسِكُم مِّنْ خَيْرٍ تَجِدُوهُ عِندَ ٱللَّهِۗ إِنَّ ٱللَّهَ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿١١٠﴾

110. Salaaddana ooga sakadana bixiya waxaad u hormarsataan naftiinna oo khayr ah waxaad ka helaysaan Alle agtiisa, Alle na waxaad camalfalaysaan waa arkaa.

وَقَالُواْ لَن يَدْخُلَ ٱلْجَنَّةَ إِلَّا مَن كَانَ هُودًا أَوْ نَصَٰرَىٰۗ تِلْكَ أَمَانِيُّهُمْۗ قُلْ هَاتُواْ بُرْهَٰنَكُمْ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿١١١﴾

111. Waxay dhaheen ma galo jannada ruuxaan yuhuud ahayn ama nasaaro, taasina waa yididdiilo (been ah), waxaad dhahdaa keena xujadiinna haddaad run sheegeysaan.

بَلَىٰ مَنْ أَسْلَمَ وَجْهَهُۥ لِلَّهِ وَهُوَ مُحْسِنٌ فَلَهُۥٓ أَجْرُهُۥ عِندَ رَبِّهِۦ وَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿١١٢﴾

112. Ruuxiise u hoggaamiya wajigiisa Alle isagoo sama fala ah, wuxuu ku leeyahay ajrigiisa Alle agtiisa, mana cabsadaan mana walbahaaraan.

وَقَالَتِ ٱلْيَهُودُ لَيْسَتِ ٱلنَّصَٰرَىٰ عَلَىٰ شَىْءٍ وَقَالَتِ ٱلنَّصَٰرَىٰ لَيْسَتِ ٱلْيَهُودُ عَلَىٰ شَىْءٍ وَهُمْ يَتْلُونَ ٱلْكِتَٰبَۗ كَذَٰلِكَ قَالَ ٱلَّذِينَ لَا يَعْلَمُونَ مِثْلَ قَوْلِهِمْۚ فَٱللَّهُ يَحْكُمُ بَيْنَهُمْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ فِيمَا كَانُواْ فِيهِ يَخْتَلِفُونَ ﴿١١٣﴾

113. Yuhuud waxay tidhi nasaaro waxba ma aha, nasaarana waxay tidhi yuhuuddu wax ma aha, iyagoo akhrin kitaabka (tawreed iyo injiilba) saasay dhahaan kuwaan wax ogaynna "gaaladii carbeed", hadalkoodoo kale. Alle na wuu kala xukumin dhexdooda maalinta qiyaame waxay isku diidanaayeen.

Gaalo waxay jecel yihiin in muslimiintu gaaloobaan oo xaqa ka leexdaan, xasad iyo xumaan darteed, waase in xaqa lagu sugnaado warkoodana aan la maqlin, waxay kaloo sheegeen yuhuud iyo nasaaraba in mid walba iyadu xaqa ku taagan tahay ee tan kale ayna waxba ahayn, janno galiddeed iyo hanuunkuna ma aha sheegasho ee waa toosni iyo camal fiican oo la falo, taas darteed yuu

Alle ku ballan qaaday inuu kala bixin dadka maalinta qiyaame waxay isku diiddanaayeen, waxaana sugnaatay in Nabigu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): ciddii camal fasha waxaan camalkannaga ahayn waa wax la tuuri (la aqbalayn). Muslim ayaa weriyay. **[Al-Baqarah: 109-113].**

وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّن مَّنَعَ مَسَٰجِدَ ٱللَّهِ أَن يُذْكَرَ فِيهَا ٱسْمُهُۥ وَسَعَىٰ فِى خَرَابِهَآ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ مَا كَانَ لَهُمْ أَن يَدْخُلُوهَآ إِلَّا خَآئِفِينَ ۚ لَهُمْ فِى ٱلدُّنْيَا خِزْىٌ وَلَهُمْ فِى ٱلْءَاخِرَةِ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿١١٤﴾

114. Cidna kama dulmi badna ruux reebay (diiday) in masaajidda Alle dhexdeeda lagu xuso magaciisa, una camal fala say u kharaabi lahayd (masaajiddu) kuwaas (gaalada ah) xaq uma leh inay galaan masaajidda iyagoo cabsan mooyee, adduunka waxay ku mudan dulli aakhirana cadaab wayn.

وَلِلَّهِ ٱلْمَشْرِقُ وَٱلْمَغْرِبُ ۚ فَأَيْنَمَا تُوَلُّوا۟ فَثَمَّ وَجْهُ ٱللَّهِ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ وَٰسِعٌ عَلِيمٌ ﴿١١٥﴾

115. Qorrax ka soo bax iyo u dhacba Alle ayaa iska leh, meel kastood u jeedsataanna waa jaho Alle (markaad qiblada garan weydaan) Alle na waa waasac (naxariistiisu) wax walbana og.

وَقَالُوا۟ ٱتَّخَذَ ٱللَّهُ وَلَدًا ۗ سُبْحَٰنَهُۥ ۖ بَل لَّهُۥ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۖ كُلٌّ لَّهُۥ قَٰنِتُونَ ﴿١١٦﴾

116. Waxay dhaheen gaaladii wuxuu yeeshay Alle ilmo, waana ka nasahan yahay, saas ma aha ee waxaa u sugnaaday Alle waxa ku jira samada iyo dhulka, dhammaanna Alle ayay u hoggaansamaan.

بَدِيعُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۖ وَإِذَا قَضَىٰٓ أَمْرًا فَإِنَّمَا يَقُولُ لَهُۥ كُن فَيَكُونُ ﴿١١٧﴾

117. Isagaa abuuray samooyinka iyo dhulka, markuu doono arrinna wuxuu uun dhahaa ahaw wuuna ahaadaa.

وَقَالَ ٱلَّذِينَ لَا يَعْلَمُونَ لَوْلَا يُكَلِّمُنَا ٱللَّهُ أَوْ تَأْتِينَآ ءَايَةٌ ۗ كَذَٰلِكَ قَالَ ٱلَّذِينَ

118. Waxay dhaheen kuwii aan wax ogayn (gaaladii) muxuu Alle noola hadli waayey ama

noogu imaan wayday aayad, saasoo kaley dhaheen kuwii ka horreeyey hadalkooda oo kale, waxaa is shabbahday (isu ekaatay) quluubtooda dhab ahaan yaan aayadaha ugu caddaynay ciddii wax yaqiinin.

مِن قَبْلِهِم مِّثْلَ قَوْلِهِمْ ۘ تَشَٰبَهَتْ قُلُوبُهُمْ ۗ قَدْ بَيَّنَّا ٱلْءَايَٰتِ لِقَوْمٍ يُوقِنُونَ ﴿١١٨﴾

Cid ka dulmi badan ma jiro ruux reebay in la nooleeyo masaajidda Alle, laguna xuso magaciisa, inuu kharaabana doona, cidda saas yeesha waa in la cabsi galiyo, dulli baana u sugnaaday adduun iyo aakhiraba, adduunkana Alle ayaa iska leh, meel kastood ujeedsato, ama sunnada ama ciddii wareerta, Alle na waa ka nasahan yahay carruur, wuxuu iska leeyahay waxa ku sugan cirka iyo dhulka, wax walbana Alle ayuu u hoggaansamaa, wuxuu doonana wuu ahaadaa, gaaladuna waxay had iyo jeer warsadaan waxyaalo waawayn, iyagoo hadalku isku mid yahay, waxaana ugu wacan inayan wax yaqiinsanayn, Zayd wuxuu yidhi: cidna uma habboona inuu baytka dadka ka celiyo. **[Al-Baqarah: 114-118].**

119. Annagaa ku dirray Nabiyow adoo xaq wata oo bishaarayn digana, lagu warsanna mayo ehelka (naarta) jaxiimo.

إِنَّآ أَرْسَلْنَٰكَ بِٱلْحَقِّ بَشِيرًا وَنَذِيرًا ۖ وَلَا تُسْـَٔلُ عَنْ أَصْحَٰبِ ٱلْجَحِيمِ ﴿١١٩﴾

120. Kaama raalli noqdaan yuhuud iyo nasaara intaad ka raacdo diintooda, waxaad dhahdaa hanuunka Alle ayaa hanuun ah, haddaad raacdo hawadooda intuu kuu yimid cilmi ka dib, kama heshid xagga Alle sokeeye jecel iyo gargaare (midna).

وَلَن تَرْضَىٰ عَنكَ ٱلْيَهُودُ وَلَا ٱلنَّصَٰرَىٰ حَتَّىٰ تَتَّبِعَ مِلَّتَهُمْ ۗ قُلْ إِنَّ هُدَى ٱللَّهِ هُوَ ٱلْهُدَىٰ ۗ وَلَئِنِ ٱتَّبَعْتَ أَهْوَآءَهُم بَعْدَ ٱلَّذِى جَآءَكَ مِنَ ٱلْعِلْمِ ۙ مَا لَكَ مِنَ ٱللَّهِ مِن وَلِىٍّ وَلَا نَصِيرٍ ﴿١٢٠﴾

121. Kuwaan siinnay kitaabka waxay u raacaan raacid xaq ah (u akhriyaan) kuwaasina waxay rumeyn quraanka, ciddii ka gaalowdana quraankase (ama Nabiga) waa cidda khasaartay uun.

ٱلَّذِينَ ءَاتَيْنَٰهُمُ ٱلْكِتَٰبَ يَتْلُونَهُۥ حَقَّ تِلَاوَتِهِۦٓ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ يُؤْمِنُونَ بِهِۦ ۗ وَمَن يَكْفُرْ بِهِۦ فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْخَٰسِرُونَ ﴿١٢١﴾

يَٰبَنِيٓ إِسۡرَٰٓءِيلَ ٱذۡكُرُواْ نِعۡمَتِيَ ٱلَّتِيٓ أَنۡعَمۡتُ عَلَيۡكُمۡ وَأَنِّي فَضَّلۡتُكُمۡ عَلَى ٱلۡعَٰلَمِينَ ﴿١٢٢﴾

122. Banii israa'iilow xusa nicmadaydii aan idiinku nicmeeyey iyo inaan idinka fadilay adduunka (waqtigiinnii).

وَٱتَّقُواْ يَوۡمٗا لَّا تَجۡزِي نَفۡسٌ عَن نَّفۡسٖ شَيۡـٔٗا وَلَا يُقۡبَلُ مِنۡهَا عَدۡلٞ وَلَا تَنفَعُهَا شَفَٰعَةٞ وَلَا هُمۡ يُنصَرُونَ ﴿١٢٣﴾

123. Ka dhawrsada maalintayna nafna naf kale ka deeqaynin waxba, furashana aan laga aqbalayn, shafeecana ayan anfacayn oona loo gargaarayn.

Nabiga Muxamed ah (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) Alle ayaa diray, waajibkiisana wuu gutay, ehelu naarkana wax laga weeydiin maayo, tan kale yuhuud iyo nasaara iyo gaalaba kaama raalli noqdaan intaad ka raacdid waxay rabaan, hanuun iyo wanaagna waa midka Alle, ciddii warkooda raacdana wax Alle ka soo haray oo u gargaari ma jiro, dadkase kitaabka rumaysan waxay si fiican u raacaan kitaabkaas wayna rumeeyaan, ciddiise ka gaalowda waa mid khasaartay. Quraankana wax badan yuu Alle ku sheegay inuu u nicmeeyey banii israa'iil markay xaqa ku toosnaayeen, markayse xumaan sameeyaan waxay la kulmi ciqaab daran, Cabdullaahi binu Mascuud wuxuu sheegay in kuwa quraanka u raaca si xaq ah ay yihiin kuwa wuxuu banneeyay raaca, wuxuu reebana ka jooga, una akhriya sida Alle u soo dajiyey. **[Al-Baqarah: 119-123].**

* وَإِذِ ٱبۡتَلَىٰٓ إِبۡرَٰهِـۧمَ رَبُّهُۥ بِكَلِمَٰتٖ فَأَتَمَّهُنَّۖ قَالَ إِنِّي جَاعِلُكَ لِلنَّاسِ إِمَامٗاۖ قَالَ وَمِن ذُرِّيَّتِيۖ قَالَ لَا يَنَالُ عَهۡدِي ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿١٢٤﴾

124. Xusuusta marka Alle ku imtixaamay Nabi Ibraahim kalimooyin (ereyo) uuna dhammeeyey, kuna yidhi waxaan kaaga yeeli dadka imaam, wuxuuna yidhi (Ibraahiim) carruurtaydana (ka yeel), (Alle) wuxuu yidhi ballankaygaa (fiican) ma gaadho daalimiinta.

وَإِذۡ جَعَلۡنَا ٱلۡبَيۡتَ مَثَابَةٗ لِّلنَّاسِ وَأَمۡنٗا وَٱتَّخِذُواْ مِن مَّقَامِ إِبۡرَٰهِـۧمَ مُصَلّٗىۖ وَعَهِدۡنَآ إِلَىٰٓ إِبۡرَٰهِـۧمَ وَإِسۡمَٰعِيلَ

125. Xusuuso markaan ka yeellay baydka (kacbada) meel dadku ku kulmo, iyo nabadgalyo kana yeesha maqaamka Ibraahiim

meel lagu tukado, waxaan u waxyoonnay Nabi Ibraahim iyo Ismaaciil inay u daahiriyaan baydkayaga kuwa dhawaafi, kuwa ku nagi, iyo kuwa rukuuci ee sujuudi.

أَن طَهِّرَا بَيْتِيَ لِلطَّآئِفِينَ وَٱلْعَٰكِفِينَ وَٱلرُّكَّعِ ٱلسُّجُودِ ﴿١٢٥﴾

126. Xusuuso markuu yidhi (Nabi) Ibraahiim Allow ka yeel magaaladan (makka) aamin kuna arzaaq dadkeeda midho kooda rumeeya Alle iyo maalinta dambe (qiyaamada), (Alle) wuxuu yidhi: iyo kan gaaloobaba waan u raaxayn in yar markaas waannu galin cadaabka naarta meel la ahaadana iyadaa u xun.

وَإِذْ قَالَ إِبْرَٰهِـۧمُ رَبِّ ٱجْعَلْ هَٰذَا بَلَدًا ءَامِنًا وَٱرْزُقْ أَهْلَهُۥ مِنَ ٱلثَّمَرَٰتِ مَنْ ءَامَنَ مِنْهُم بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ ۖ قَالَ وَمَن كَفَرَ فَأُمَتِّعُهُۥ قَلِيلًا ثُمَّ أَضْطَرُّهُۥٓ إِلَىٰ عَذَابِ ٱلنَّارِ ۖ وَبِئْسَ ٱلْمَصِيرُ ﴿١٢٦﴾

127. Xusuuso markuu kor yeelay Nabi Ibraahim tiirarka kacbada iyo Nabi Ismaaciil iyagoo leh Allow naga aqbal adaa waxna maqla waxna oge.

وَإِذْ يَرْفَعُ إِبْرَٰهِـۧمُ ٱلْقَوَاعِدَ مِنَ ٱلْبَيْتِ وَإِسْمَٰعِيلُ رَبَّنَا تَقَبَّلْ مِنَّآ ۖ إِنَّكَ أَنتَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْعَلِيمُ ﴿١٢٧﴾

128. Allow naga yeel kuwa kuu hoggaansama, faracannagana ka yeel ummad kuu hoggaansanta, nana tusi camalkannaga (xajka) nagana toobad aqbal adaa toobad aqbal badane, naxariisbadanana ahe.

رَبَّنَا وَٱجْعَلْنَا مُسْلِمَيْنِ لَكَ وَمِن ذُرِّيَّتِنَآ أُمَّةً مُّسْلِمَةً لَّكَ وَأَرِنَا مَنَاسِكَنَا وَتُبْ عَلَيْنَآ ۖ إِنَّكَ أَنتَ ٱلتَّوَّابُ ٱلرَّحِيمُ ﴿١٢٨﴾

Nabi lbraahim Alle ayaa imtixaamay, wuuna ku guulaystay imtixaamkii, wuxuu Alle ka dhigay imaam, isaga iyo wiilkiisii Nabi Ismaaciil yaana dhisay kacbada, Alle na way baryeen wuuna ka aqbalay baryadii reer makaadna Alle u baryeen inta xaqa raacda in Alle irzaaqo, Alle na wuu arzaaqi cid kasta, gaaladana aakharuu ka aarsan, waxayna ku tusin aayaduhu waynida iyo sharafta kacbada iyo magaalada Makaadee barakeysan. **[Al-Baqarah: 124-128].**

رَبَّنَا وَٱبۡعَثۡ فِيهِمۡ رَسُولٗا مِّنۡهُمۡ يَتۡلُواْ عَلَيۡهِمۡ ءَايَٰتِكَ وَيُعَلِّمُهُمُ ٱلۡكِتَٰبَ وَٱلۡحِكۡمَةَ وَيُزَكِّيهِمۡۚ إِنَّكَ أَنتَ ٱلۡعَزِيزُ ٱلۡحَكِيمُ ١٢٩

129. Allow u soo bixi rasuul ka mid ah oo u akhriya aayaadkaaga barana kitaabka (quraanka) iyo xigmada (sunnada Nabiga) oo nadiifiya adigaa adkaade, falsame ahe.

وَمَن يَرۡغَبُ عَن مِّلَّةِ إِبۡرَٰهِـۧمَ إِلَّا مَن سَفِهَ نَفۡسَهُۥۚ وَلَقَدِ ٱصۡطَفَيۡنَٰهُ فِي ٱلدُّنۡيَاۖ وَإِنَّهُۥ فِي ٱلۡأٓخِرَةِ لَمِنَ ٱلصَّٰلِحِينَ ١٣٠

130. Yaa naca diinta Nabi Ibraahim ruux xumeeyey naftiisa mooyee, waana doorannay Nabi Ibraahiim, adduunyada, aakhirana wuxuu ka mid noqon kuwa suusuubban.

إِذۡ قَالَ لَهُۥ رَبُّهُۥٓ أَسۡلِمۡۖ قَالَ أَسۡلَمۡتُ لِرَبِّ ٱلۡعَٰلَمِينَ ١٣١

131. Xusuuso markuu Alle ku yidhi hoggaansan oo uu yidhi waan u hoggaansamay Allaha caalamka.

وَوَصَّىٰ بِهَآ إِبۡرَٰهِـۧمُ بَنِيهِ وَيَعۡقُوبُ يَٰبَنِيَّ إِنَّ ٱللَّهَ ٱصۡطَفَىٰ لَكُمُ ٱلدِّينَ فَلَا تَمُوتُنَّ إِلَّا وَأَنتُم مُّسۡلِمُونَ ١٣٢

132. Wuxuu u dardaarmay arrintaas (Nabi) Ibraahim carruurtiisa, Nabi Yacquubna wuu u dardaarmay, wuxuuna yidhi caruurtaydiiyey Alle wuxuu idiin doortay diinta ee ha dhimannina idinkoon muslim ahayn.

Waynida xaramka iyo kacbada iyo waxa ku soo arooray waxay ku qoran tahay kutubaha dheer dheer, tan kale waxay aayaduhu caddeeyeen in Nabi Ibraahim Alle warsaday inuu Maka ka yeelo magaalo aamin ah, oo dadkeeda la arzuqo, waxaa kale oos warsaday Alle in camalkooda la aqbalo isaga iyo wiilkiisa Nabi Ismaaciil muslimna laga yeelo iyo carruurtooda, camalkooda fiicanna la tusiyo. Nabi iyaga ka mid ahna loo soo bixiyo (Nabiga Muxamed ah naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) si uu u baro xaqa, ugana leexiyo xumaanta, saas darteed diinta islaamka oo ah diintii Nabi Ibraahim iyo Nabiyadii kale ma naco ruuxaan doqon aan wax garanayn ahayn mooyee, laguna dhaqmo laguna dhinto, Nabiguna wuxuu yidhi: Maka Alle ayaa xarrimay ee dad ma xarrimin, cidna uma bannaana inuu dhiig ku daadiyo, ama geedaheeda guro. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim.

Waxaa kale oo Nabigu yidhi: anaa ugu dambeeya Nabiyada Alle agtiisa isagoo Nabi Aadamna dhoobada ku dhex jiro, waxaana ahay baryadii Nabi Ibraahim iyo bishaaradii Nabi Ciise, hooyadayna way aragtay, saasayna ahaayeen Nabiyada hooyooyinkood, waxaa wariyey imaam Axmed. Waxaase habboon in wanaaggoodii la raaco. **[Al-Baqarah: 129-132].**

أَمْ كُنتُمْ شُهَدَآءَ إِذْ حَضَرَ يَعْقُوبَ
ٱلْمَوْتُ إِذْ قَالَ لِبَنِيهِ مَا تَعْبُدُونَ مِنۢ
بَعْدِى ۖ قَالُوا۟ نَعْبُدُ إِلَٰهَكَ وَإِلَٰهَ ءَابَآئِكَ
إِبْرَٰهِـۧمَ وَإِسْمَٰعِيلَ وَإِسْحَٰقَ إِلَٰهًا وَٰحِدًا
وَنَحْنُ لَهُۥ مُسْلِمُونَ ﴿١٣٣﴾

133. Miyaad joogteen (yuhuuday) marka geeridu u timid (Nabi) Yacquub markuu ku yidhi carruurtiisa maxaad caabudaysaan gadaashay, ayna dheheen waxaan caabudaynaa Ilaahaaga iyo Ilaaha aabayowgaa Ibraahim, Ismaaciil iyo Isxaaq, Alle kaliya, isagaanna u hoggaansamaynaa.

تِلْكَ أُمَّةٌ قَدْ خَلَتْ ۖ لَهَا مَا كَسَبَتْ
وَلَكُم مَّا كَسَبْتُمْ ۖ وَلَا تُسْـَٔلُونَ عَمَّا
كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿١٣٤﴾

134. Taasina waa ummad taktay, waxayna mudatay waxay kasbatay, idinkuna waxaad mudanaysaan waxaad kasbateen, laydinna warsan maayo waxay camal falayeen.

وَقَالُوا۟ كُونُوا۟ هُودًا أَوْ نَصَٰرَىٰ تَهْتَدُوا۟ ۗ
قُلْ بَلْ مِلَّةَ إِبْرَٰهِـۧمَ حَنِيفًا ۖ وَمَا كَانَ مِنَ
ٱلْمُشْرِكِينَ ﴿١٣٥﴾

135. Waxay ku dhaheen gaaladii muslimiinta ama yuhuud noqda ama nasaara aad hanuun taane, waxaad dhahdaa mayee milladda (diinta Nabi) Ibrahim yaan raacaynaa ee xaqa u iishay, kamana mid ahayn gaalada.

قُولُوٓا۟ ءَامَنَّا بِٱللَّهِ وَمَآ أُنزِلَ إِلَيْنَا وَمَآ
أُنزِلَ إِلَىٰٓ إِبْرَٰهِـۧمَ وَإِسْمَٰعِيلَ وَإِسْحَٰقَ
وَيَعْقُوبَ وَٱلْأَسْبَاطِ وَمَآ أُوتِىَ

136. Waxaad dhahdaan waxaan rumaynay Alle iyo waxa naloo soo dajiyey iyo waxa lagu soo dajiyay Ibraahiim,

Ismaaciil, Isxaaq, Yacquub iyo carruurtoodii iyo wixii la siiyay (Nabi) Muuse iyo (Nabi) Ciise iyo wixii laga siiyey Nabiyadii (kale) xagga Rabbigood, kala gaynna mayno dhexdooda, waxaana u hogaansamaynaa Alle.

مُوسَىٰ وَعِيسَىٰ وَمَآ أُوتِيَ ٱلنَّبِيُّونَ مِن رَّبِّهِمْ لَا نُفَرِّقُ بَيْنَ أَحَدٍ مِّنْهُمْ وَنَحْنُ لَهُۥ مُسْلِمُونَ ﴿١٣٦﴾

137. Hadday u rumeeyaan saad u rumayseen way hanuuneen, hadday jeedsadaanna waxay ku sugan yihiin khilaaf, waxaana idinka kaafin Alle isagaa wax maqla waxna oge.

فَإِنْ ءَامَنُوا۟ بِمِثْلِ مَآ ءَامَنتُم بِهِۦ فَقَدِ ٱهْتَدَوا۟ ۖ وَّإِن تَوَلَّوْا۟ فَإِنَّمَا هُمْ فِى شِقَاقٍ ۖ فَسَيَكْفِيكَهُمُ ٱللَّهُ ۚ وَهُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْعَلِيمُ ﴿١٣٧﴾

Alle wuxuu halkan ka qisoon Nabi Yacquub iyo carruurtiisii iyo wuxuu u dardaarmay markuu dhimanayey iyo inay haystaan milladdii awoowyadood (Nabi) Ibraahim, Ismaaciil iyo Isxaaq, hase ahaatee waxay yuhuud iyo nasaara sheegeen in hanuunkooda la raaco, waa wax kama jiraan ee diinta xaqa ah waa diinta Nabi lbraahim ee diinta islaamka ah, muslimiintuna waxay rumeysan yihiin Alle, quraanka, wixii lagu soo dajiyay Nabi Ibraahim, Ismaaciil, Isxaaq, Yacquub iyo carruurtoodii iyo wixii Nabi Muuse iyo Nabi Ciise lagu soo dejiyay, mana kala qaybiyaan xaqa, haddayse gaaladu u rumeeyaan sida muslimiinta waa hagaag, haddii kale waa inaan xaqa ku toosnaanno Alle ayaa ina kaafinaayee. **[Al-Baqarah: 133-137].**

138. Ku sugnaada diinta Alle, yaa ka fiican diinta Alle (ma jiro), isagaanna caabudaynaa.

صِبْغَةَ ٱللَّهِ ۖ وَمَنْ أَحْسَنُ مِنَ ٱللَّهِ صِبْغَةً ۖ وَنَحْنُ لَهُۥ عَٰبِدُونَ ﴿١٣٨﴾

139. Waxaad dhahdaa Nabiyow ma waxaad igula doodaysaan Alle isagoo Rabbigeenna iyo Rabbigiinna ah, annaguna camalkannagu noo sugnaaday idinkuna camalkiinnu, isagaanna u kali yeelaynaa diinta.

قُلْ أَتُحَآجُّونَنَا فِى ٱللَّهِ وَهُوَ رَبُّنَا وَرَبُّكُمْ ۖ وَلَنَآ أَعْمَٰلُنَا وَلَكُمْ أَعْمَٰلُكُمْ ۖ وَنَحْنُ لَهُۥ مُخْلِصُونَ ﴿١٣٩﴾

أَمْ تَقُولُونَ إِنَّ إِبْرَٰهِـۧمَ وَإِسْمَٰعِيلَ وَإِسْحَٰقَ وَيَعْقُوبَ وَٱلْأَسْبَاطَ كَانُوا۟ هُودًا أَوْ نَصَٰرَىٰ ۗ قُلْ ءَأَنتُمْ أَعْلَمُ أَمِ ٱللَّهُ ۗ وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّن كَتَمَ شَهَٰدَةً عِندَهُۥ مِنَ ٱللَّهِ ۗ وَمَا ٱللَّهُ بِغَٰفِلٍ عَمَّا تَعْمَلُونَ ﴿١٤٠﴾

140. Mise waxaad dhahaysaan Nabi Ibraahim, Ismaciil, Isxaaq, Yacquub iyo carruurtii waxay ahaayeen yuhuud ama nasaara, waxaad dhahdaa ma idinkaa wax og mise Alle, yaa ka dulmi badan ruux qariya marag agtiisa Alle ku yeeshay, Alle na ma halmaamo waxaad falaysaan.

تِلْكَ أُمَّةٌ قَدْ خَلَتْ ۖ لَهَا مَا كَسَبَتْ وَلَكُم مَّا كَسَبْتُمْ ۖ وَلَا تُسْـَٔلُونَ عَمَّا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿١٤١﴾

141. Taasi waa ummad tagtay, waxayna mudan waxay kasbatay idinkuna waxaad mudanaysaan waxaad kasbateen, laydin warsanna maayo waxay camal falayeen.

Ma aha xaalku sida yuhuud iyo nasaarada oo ah in la dhaho waxaa la sibqin ilmo, waxaase khayr iyo wanaagba ah diinta islaamka ee ah diinta hanuunka iyo toosnida, mana aha in dood xaq darro iyo qallooc ah la doodo.

Nabi Ibraahim iyo Ismaaciil, Isxaaq, Yacquub iyo carruurtuna ma ahayn yuhuud iyo nasaara midna, maxaa yeelay cidna Alle wax kama oga, mana halmaamo waxa la camal fali, ummad horreysay oo xaqa ku toosnayd in wax laga sheegana ma aha, maxaa yeelay cid walba waxay mudan waxay kasbatay wanaag iyo xumaanba.

Qataade waxaa laga wariyey inuu yidhi: yuhuud iyo nasaaraba waxay sibqiyaan (wax mariyaan) carruurtooda, sibqinta Alle na waa diinta islaamka, wax ka fiican oo ka nadiifsanna ma jiro, waana diinta Nabi Nuux iyo Nabiyadii ka dambeeyey. **[Al-Baqarah: 138-141].**

* سَيَقُولُ ٱلسُّفَهَآءُ مِنَ ٱلنَّاسِ مَا وَلَّىٰهُمْ عَن قِبْلَتِهِمُ ٱلَّتِى كَانُوا۟ عَلَيْهَا ۚ قُل لِّلَّهِ ٱلْمَشْرِقُ وَٱلْمَغْرِبُ ۚ يَهْدِى مَن يَشَآءُ إِلَىٰ صِرَٰطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿١٤٢﴾

142. Waxay dhihi kuwii maangaabta ahaa ee dadka (gaalada) ka mid ahaa maxaa ka jeediyey muslimiinta qibladay qaabili jireen (baytul maqdis) waxaad dhahdaa Nabiyow qorrax ka soo bax iyo u dhacba Alle ayaa iska leh, wuxuuna ku hanuunin cidduu doono jidka toosan.

وَكَذَٰلِكَ جَعَلْنَٰكُمْ أُمَّةً وَسَطًا لِّتَكُونُوا۟
شُهَدَآءَ عَلَى ٱلنَّاسِ وَيَكُونَ ٱلرَّسُولُ
عَلَيْكُمْ شَهِيدًا ۗ وَمَا جَعَلْنَا ٱلْقِبْلَةَ
ٱلَّتِى كُنتَ عَلَيْهَآ إِلَّا لِنَعْلَمَ مَن يَتَّبِعُ
ٱلرَّسُولَ مِمَّن يَنقَلِبُ عَلَىٰ عَقِبَيْهِ ۚ وَإِن
كَانَتْ لَكَبِيرَةً إِلَّا عَلَى ٱلَّذِينَ هَدَى ٱللَّهُ ۗ
وَمَا كَانَ ٱللَّهُ لِيُضِيعَ إِيمَٰنَكُمْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ
بِٱلنَّاسِ لَرَءُوفٌ رَّحِيمٌ ﴿١٤٣﴾

143. Saasaan idinka dhignay ummad caadil (khayr ah) si aad marag ugu noqotaan dadka, rasuulkuna idiinku noqdo markhaati, mana aannaan yeelin qibladii aad qaabili jirtay in aannu agaanno oo ay kala muuqato ruuxa Rasuulka raaca iyo kan dib u noqon (gaaloobi) mooyee, waana arrin ku weyn dadka marka laga reebo kuwa Alle hanuuniyey, Alle na ma dhumiyo iimaankiinna (salaaddiinna) Alle na waa u naxariis badan yahay dadka.

قَدْ نَرَىٰ تَقَلُّبَ وَجْهِكَ فِى ٱلسَّمَآءِ ۖ
فَلَنُوَلِّيَنَّكَ قِبْلَةً تَرْضَىٰهَا ۚ فَوَلِّ وَجْهَكَ
شَطْرَ ٱلْمَسْجِدِ ٱلْحَرَامِ ۚ وَحَيْثُ مَا كُنتُمْ
فَوَلُّوا۟ وُجُوهَكُمْ شَطْرَهُۥ ۗ وَإِنَّ ٱلَّذِينَ
أُوتُوا۟ ٱلْكِتَٰبَ لَيَعْلَمُونَ أَنَّهُ ٱلْحَقُّ مِن
رَّبِّهِمْ ۗ وَمَا ٱللَّهُ بِغَٰفِلٍ عَمَّا يَعْمَلُونَ ﴿١٤٤﴾

144. Dhab ahaan yaan ugu jeednay gagaddoonka wajigaaga ee samada, waxaanna kuu jeedinaynaa qiblad aad ka raalli noqon, ee u jeedi wajigaaga xagga masjidka xurmeysan, meelkastood joogtaanna ujeediya wajigiinna xaggiisa, kuwa kitaabka la siiyeyna waa og yihiin in jeedintaas xaq Alle tahay, Alle na ma halmaansana waxay camal fali.

Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) wuxuu qaabili jiray intii muddo ah markuu tukan xagga quddus, markii Alle faray inuu kacbada u jeedsado yaa kuwii maangaabta dicaayad iyo war fureen, iyagoo is warsan waxa Nabiga jeediyey, Alle ayaase xukunka leh, ummadda muslimka ahna ka dhigay marag caadil ah, siduu Nabiga uga yeelay maragga ummadda, arrinta u jeedinta qibladana uma fududa ruuxaan mu'min ahayn Alle na hanuuniyey, kuwii qibladii hore u tukadayna Alle ma halleeyo camalkooda, Alle na wuxuu daalacanayey ogaana jacaylka Nabiga in kacbada loo jeediyo, inay arrintaasu xaq tahayna waxaa ogayd ciddii xaqa rabta.

Ibnu Cumar waxaa laga wariyey inuu yidhi: dadkoo ku tukan quba salaad subax yuu ruux u yimid kuna yidhi Rasuulkii xalaa lagu soo dajiyey quraan inuu kacbada qaabilo, shaam bayna u jeedeen. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim. **[Al-Baqarah: 142-144].**

وَلَئِنْ أَتَيْتَ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْكِتَٰبَ بِكُلِّ ءَايَةٍ مَّا تَبِعُوا۟ قِبْلَتَكَ ۚ وَمَآ أَنتَ بِتَابِعٍ قِبْلَتَهُمْ ۚ وَمَا بَعْضُهُم بِتَابِعٍ قِبْلَةَ بَعْضٍ ۚ وَلَئِنِ ٱتَّبَعْتَ أَهْوَآءَهُم مِّنۢ بَعْدِ مَا جَآءَكَ مِنَ ٱلْعِلْمِ ۙ إِنَّكَ إِذًا لَّمِنَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿١٤٥﴾

145. Hadaad ula timaado kuwa ehelu kitaabka ah aayad kasta ma raacayaan qibladaada adiguna ma raacaysid qibladooda, qaarkoodna ma aha kan raaca qiblada qaarka kale, haddaad raacdo waxay jecel yihiin gaaladu, inta cilmi kuu yimid (waxyiga Alle) dabadeed, waxaad ka mid noqon daalimiinta.

ٱلَّذِينَ ءَاتَيْنَٰهُمُ ٱلْكِتَٰبَ يَعْرِفُونَهُۥ كَمَا يَعْرِفُونَ أَبْنَآءَهُمْ ۖ وَإِنَّ فَرِيقًا مِّنْهُمْ لَيَكْتُمُونَ ٱلْحَقَّ وَهُمْ يَعْلَمُونَ ﴿١٤٦﴾

146. Kuwaan siinnay kitaabka waxay u yaqaannaan Nabiga (iyo xaquu la yimid) siday u yaqaannaan carruurtooda, koox ka mid ahna waxay qarin xaqa iyagoo og.

ٱلْحَقُّ مِن رَّبِّكَ فَلَا تَكُونَنَّ مِنَ ٱلْمُمْتَرِينَ ﴿١٤٧﴾

147. Xaqu wuxuu ka yimid xagga Allehaa ee ha ka mid noqonnin kuwa shakiya.

وَلِكُلٍّ وِجْهَةٌ هُوَ مُوَلِّيهَا ۖ فَٱسْتَبِقُوا۟ ٱلْخَيْرَٰتِ ۚ أَيْنَ مَا تَكُونُوا۟ يَأْتِ بِكُمُ ٱللَّهُ جَمِيعًا ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿١٤٨﴾

148. Cid walba waxay leedahay jaho ay dhawrto (raacdana) ee u oratama wanaagga, meel kastood ahaataanna Alle wuu idin keeni (oo idin kulmin) dhammmaantiin, Allana wax walba wuu karaa.

Ciddaan xaqa Alle rabin lama qancin karo wax kastoo loo keeno, sida xaq diidayaasha, ruuxa mu'minka ahna waa inuusan ku kadsoomin xumaantooda kana digtoonaadaa inuu jidkooda raaco, Alle na markuu ku adkeeyay Nabiga

xaalkaas waxay digniin u tahay ummaddiisa, gaaladuna way garan xaqa iyo wanaagga iyo runnimada Nabiga, hase yeeshee waxay u diidi xasad iyo xumaan jacayl, maxaa yeelay xaq cad wax la shakiyo ma aha, cid walbase wax bay aamminsan tahay kuna socotaa, waase in khayrka iyo wanaagga loo deg dego, Alle na dadka wuu kulmin qiyaamada si uu u kala bixiyo. Waxaa la wariyey in Cumar ku yidhi Cabdullaahi binu Salaam: ma garan Nabiga Muxamed ah sidaad u garan ilmahaaga markaasuu yidhi: haa, wax ka badan, amiinkiiyaa ka soo dajin cirka kuna soo dajin amiinka dhulka waana aqoonsaday, ilmahaygase ma ogi waxay fashay hooyadiis. **[Al-Baqarah: 145-148].**

وَمِنْ حَيْثُ خَرَجْتَ فَوَلِّ وَجْهَكَ شَطْرَ
ٱلْمَسْجِدِ ٱلْحَرَامِ ۖ وَإِنَّهُۥ لَلْحَقُّ مِن رَّبِّكَ ۗ
وَمَا ٱللَّهُ بِغَٰفِلٍ عَمَّا تَعْمَلُونَ ﴿١٤٩﴾

149. Meel kastood u baxdo u jeedi wajigaaga xagga masjidka xurmaysan, xaqu xagga Allehaa buu ka ahaaday Alle na ma mooga waxaad falaysaan.

وَمِنْ حَيْثُ خَرَجْتَ فَوَلِّ وَجْهَكَ شَطْرَ
ٱلْمَسْجِدِ ٱلْحَرَامِ ۖ وَحَيْثُ مَا كُنتُمْ فَوَلُّوا۟
وُجُوهَكُمْ شَطْرَهُۥ لِئَلَّا يَكُونَ لِلنَّاسِ
عَلَيْكُمْ حُجَّةٌ إِلَّا ٱلَّذِينَ ظَلَمُوا۟ مِنْهُمْ
فَلَا تَخْشَوْهُمْ وَٱخْشَوْنِى وَلِأُتِمَّ نِعْمَتِى
عَلَيْكُمْ وَلَعَلَّكُمْ تَهْتَدُونَ ﴿١٥٠﴾

150. Meel kastood u baxdana u jeedi wajigaada masjidka xurmaysan xaggiisa, meel kastood joogtaanna u jeediya wajiyadiinna xaggiisa, si ayna xujo ugu ahaan dadka korkiinna, kuwa daalimiinta ah mooyee (ee gardarrada ku socda) hana ka cabsannina ee aniga iga cabsada, waxaana idiin taam yeeli (dhammayn) nicmadayda si aad u hanuuntaan.

كَمَآ أَرْسَلْنَا فِيكُمْ رَسُولًا مِّنكُمْ
يَتْلُوا۟ عَلَيْكُمْ ءَايَٰتِنَا وَيُزَكِّيكُمْ
وَيُعَلِّمُكُمُ ٱلْكِتَٰبَ وَٱلْحِكْمَةَ
وَيُعَلِّمُكُم مَّا لَمْ تَكُونُوا۟
تَعْلَمُونَ ﴿١٥١﴾

151. (Waan idiin nicmeynay) sidaan idinku dirnay dhexdiinna rasuul idinka mid ah oo idinku akhriya aayaadkannaga, oo idin daahiriya, oo idin bara kitaabka (quraanka) iyo sunnada Nabiga, idinna bara waxaydaan aqoonnin.

فَٱذْكُرُونِيٓ أَذْكُرْكُمْ وَٱشْكُرُواْ لِي وَلَا تَكْفُرُونِ ﴿١٥٢﴾

152. Ee i xusa aan idin ku xusee (naxariis iyo dambi dhaaf) iguna mahadiya hana iga gaaloobina.

Waa amar saddexaad oo Alle dadka muslimiinta ah faray inay qaabilaan masjidka kacbada ee xurmeysan, waxaana loo soo celceliyey waynida arrinta, waxaana lala hadlay ciddii kacbada u jeedda, iyo kii Maka jooga iyo kan adduunka kale jooga, waana amar waajib ah, ciddii ka murantana ayan wax xujo ah lahayn, hase yeeshee xaqdiidayaashu way iska murmi xujo la'aan, waase in Alle uun laga cabsado isagaa rasuulka inoo soo diray si uu inoo toosiyo, xaqana inoo baro, xumaantana inooga leexiyo, xusidda Alle iyo mahaddiisana waa in la badiyo. Allana wuxuu yidhi: haddaad kali igu xusto waan ku xusi si kali ah, haddaad i xusto adoo dad la joogana waxaan kugu xusi kulan ka khayr badan kiinna. Nabigana wuxuu yidhi: ruuxii Alle u nicmeeyo Alle wuxuu jecel yahay inay nicmada raadkeedu ka muuqdaan khalqigiisa. Waxaa wariyey imaam Axmed. **[Al-Baqarah: 149-152].**

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱسْتَعِينُواْ بِٱلصَّبْرِ وَٱلصَّلَوٰةِۚ إِنَّ ٱللَّهَ مَعَ ٱلصَّٰبِرِينَ ﴿١٥٣﴾

153. Kuwa (xaqa) rumeeyow kaalmaysta samir iyo salaad, Alle wuxuu la jiraa kuwa samree.

وَلَا تَقُولُواْ لِمَن يُقْتَلُ فِي سَبِيلِ ٱللَّهِ أَمْوَٰتُۢۚ بَلْ أَحْيَآءٌ وَلَٰكِن لَّا تَشْعُرُونَ ﴿١٥٤﴾

154. Hana ku dhihina kuwa lagu dilo jidka Alle (jahaadka) waa dhinteen, saas ma aha ee waa nool yihiin, mase kaseysaan.

وَلَنَبْلُوَنَّكُم بِشَيْءٍ مِّنَ ٱلْخَوْفِ وَٱلْجُوعِ وَنَقْصٍ مِّنَ ٱلْأَمْوَٰلِ وَٱلْأَنفُسِ وَٱلثَّمَرَٰتِۗ وَبَشِّرِ ٱلصَّٰبِرِينَ ﴿١٥٥﴾

155. Waxaan idin ku imtixaanaynaa wax ah: cabsi, gaajo, nusqaamin xoolaha, nafta iyo midhahaba, ee u bishaaree kuwa samra.

ٱلَّذِينَ إِذَآ أَصَٰبَتْهُم مُّصِيبَةٌ قَالُوٓاْ إِنَّا لِلَّهِ وَإِنَّآ إِلَيْهِ رَٰجِعُونَ ﴿١٥٦﴾

156. Kuwa markuu dhib ku dhoco yidhaahda Alle ayaa na leh isagaanna u noqonaynaa.

أُوْلَٰٓئِكَ عَلَيْهِمْ صَلَوَٰتٌ مِّن رَّبِّهِمْ وَرَحْمَةٌۖ وَأُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْمُهْتَدُونَ ﴿١٥٧﴾

157. Kuwaas waxaa korkooda ahaan deeq Alle iyo naxariistiisa, waana kuwa hanuunsan.

158. Safo iyo marwo waxay ka mid yihiin calaamooyinka (wayneynta) Alle ee ruuxii u xajiya baydka ama cumraysta wax ma saarra hadduu ku wareego dhexdooda, ruuxa wax dheeraad ah la yimaadana Alle wuu ku mahdin wuuna og yahay.

* إِنَّ ٱلصَّفَا وَٱلْمَرْوَةَ مِن شَعَآئِرِ ٱللَّهِ ۖ فَمَنْ حَجَّ ٱلْبَيْتَ أَوِ ٱعْتَمَرَ فَلَا جُنَاحَ عَلَيْهِ أَن يَطَّوَّفَ بِهِمَا ۚ وَمَن تَطَوَّعَ خَيْرًا فَإِنَّ ٱللَّهَ شَاكِرٌ عَلِيمٌ ﴿١٥٨﴾

Samirka iyo salaadduba way u kaalmeeyaan dadka, waana in lagu dadaalo, tan kale dadkii jidka Alle ee jahaadka ah lagu dilay ma aha dad dhintay, waxayse ku nool yihiin wanaag iyo nolol aynaan kasayn, adduunkuna waa guri imtixaan oy ku heli cabsi, gaajo, xoolaha iyo nafta iyo midhaha oo nusqaama. Waxaase loo bishaareeyey kuwa adkaysta ogna inay addoomo Alle yihiin una noqon, waxayna mudan naxariis iyo wanaag, waana kuwa toosan. Safo iyo marwo in la dawaafana waa waajib ciddii xajinaysa ama cumraysan, waxaa loo yidhi ruuxii dawaafa wax ma saarra waa in loo maleeyey inay tahay arrin soo jirtay, xadiithna waxaa ku sugnaaday: waxaa la yaab leh xaalka mu'minka hadduu khayr helo wuu ku mahdiyaa khayr bayna u noqotaa, hadduu dhib ku dhacana wuu samraa waxayna u noqotaa khayr. **[Al-Baqarah: 153-158].**

159. Kuwa qariya waxaan soo dajinnay oo aayaad ah iyo hanuun intaan dadka ugu caddaynay kitaabka ka dib kuwaas waxaa nacladi Alle iyo kuwa wax nacalada (malaa'igta iyo mu'miniinta).

إِنَّ ٱلَّذِينَ يَكْتُمُونَ مَآ أَنزَلْنَا مِنَ ٱلْبَيِّنَٰتِ وَٱلْهُدَىٰ مِنۢ بَعْدِ مَا بَيَّنَّٰهُ لِلنَّاسِ فِى ٱلْكِتَٰبِ أُو۟لَٰٓئِكَ يَلْعَنُهُمُ ٱللَّهُ وَيَلْعَنُهُمُ ٱللَّٰعِنُونَ ﴿١٥٩﴾

160. Marka laga reebo kuwa toobad keena oo wanaagga fala oo xaqa caddeeya, kuwaas waan ka toobad aqbali, waxaanna ahay toobad aqbal badane naxariis badan.

إِلَّا ٱلَّذِينَ تَابُوا۟ وَأَصْلَحُوا۟ وَبَيَّنُوا۟ فَأُو۟لَٰٓئِكَ أَتُوبُ عَلَيْهِمْ وَأَنَا ٱلتَّوَّابُ ٱلرَّحِيمُ ﴿١٦٠﴾

161. Kuwii gaaloobay oo ku dhintay gaalnimo kuwaas waxaa korkooda ah nacaladda Alle iyo malaa'igta iyo dadka dhammaan.

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَمَاتُوا۟ وَهُمْ كُفَّارٌ أُو۟لَٰٓئِكَ عَلَيْهِمْ لَعْنَةُ ٱللَّهِ وَٱلْمَلَٰٓئِكَةِ وَٱلنَّاسِ أَجْمَعِينَ ﴿١٦١﴾

خَٰلِدِينَ فِيهَا لَا يُخَفَّفُ عَنْهُمُ ٱلْعَذَابُ وَلَا هُمْ يُنظَرُونَ ﴿١٦٢﴾

162. Waxayna ku waari dhexdeeda (naarta iyo nacaladda) lagamana fududeeyo xaggooda cadaabka loomana sugo.

وَإِلَٰهُكُمْ إِلَٰهٌ وَٰحِدٌ ۖ لَّآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ٱلرَّحْمَٰنُ ٱلرَّحِيمُ ﴿١٦٣﴾

163. Macbuudkiinnu waa mid keliya, ku in la caabudaa ay xaq tahay ma jiro isaga mooyee, waana naxariis guud iyo mid gaarba naxariiste.

إِنَّ فِى خَلْقِ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَٱخْتِلَٰفِ ٱلَّيْلِ وَٱلنَّهَارِ وَٱلْفُلْكِ ٱلَّتِى تَجْرِى فِى ٱلْبَحْرِ بِمَا يَنفَعُ ٱلنَّاسَ وَمَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مِن مَّآءٍ فَأَحْيَا بِهِ ٱلْأَرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَا وَبَثَّ فِيهَا مِن كُلِّ دَآبَّةٍ وَتَصْرِيفِ ٱلرِّيَٰحِ وَٱلسَّحَابِ ٱلْمُسَخَّرِ بَيْنَ ٱلسَّمَآءِ وَٱلْأَرْضِ لَءَايَٰتٍ لِّقَوْمٍ يَعْقِلُونَ ﴿١٦٤﴾

164. Cirka abuurkiisa iyo dhulka iyo kala duwanaanta habeenka iyo maalinka iyo doonta la socota badda wax anfaca dadka iyo waxa Alle ka soo dajiyay samada oo biyo ah kuna nooleeyay dhulka intuu dhintay ka dib, kuna fidiyay dhulka daabbad kasta iyo gadgaddoonka dabaysha iyo daruuraha loo sahlay samada iyo dhulka dhexdiisa waxaa ugu sugan calaamooyin kuwa wax kasi.

Xaqa oo la qariyo waxay keentaa ciqaab Alle iyo nacalad, illeen islaamku waa in wanaagga la is faro, xumaantana la iska reebo, ciddii saas yeesha oo xaqa caddaysa oo wanaag fasha Alle wuu ka toobad aqbalaa, gaalnimo lagu dhinto yayna ciqaab ku dhan tahay, dadkana waxaa ugu filan calaamaad abuurka cirka, dhulka, habeenka, dharaarta, maraakiibta badda socota, roobka, iyo daruuraha xawaarayn cirka iyo dhulka dhexdooda, Abuudaa'uud wuxuu wariyay in Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) yidhi: ruuxii cilmi la warsado oo qariya waxaa lagu xakamayn qiyaamada xakama naar ah. **[Al-Baqarah: 159-164].**

وَمِنَ ٱلنَّاسِ مَن يَتَّخِذُ مِن دُونِ ٱللَّهِ أَندَادًا يُحِبُّونَهُمْ كَحُبِّ ٱللَّهِ ۖ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ أَشَدُّ حُبًّا لِّلَّهِ ۗ

165. Dadka waxaa ka mid ah cid ka yeelan Alle ka sokow wax lala caabudo una jecel yihiin say u jecel yihiin Alle, kuwa rumeeyey xaqa yaa ka daran

وَلَوْ يَرَى ٱلَّذِينَ ظَلَمُوٓاْ إِذْ يَرَوْنَ ٱلْعَذَابَ أَنَّ ٱلْقُوَّةَ لِلَّهِ جَمِيعًا وَأَنَّ ٱللَّهَ شَدِيدُ ٱلْعَذَابِ ﴿١٦٥﴾

jeceylkooda Alle, hadday arkaan kuwa dulmiga falay cadaabka (aakharo) waxay ogaan lahaayeen in xoog dhammaantiis u sugnaaday Alle, Alle na cadaabkiisu daran yahay.

إِذْ تَبَرَّأَ ٱلَّذِينَ ٱتُّبِعُواْ مِنَ ٱلَّذِينَ ٱتَّبَعُواْ وَرَأَوُاْ ٱلْعَذَابَ وَتَقَطَّعَتْ بِهِمُ ٱلْأَسْبَابُ ﴿١٦٦﴾

166. Markay iska bari yeelaan kuwii la raacay kuwii raacay, oy arkeen cadaabka, kalana go'ay xidhiidhkoodii.

وَقَالَ ٱلَّذِينَ ٱتَّبَعُواْ لَوْ أَنَّ لَنَا كَرَّةً فَنَتَبَرَّأَ مِنْهُمْ كَمَا تَبَرَّءُواْ مِنَّا ۗ كَذَٰلِكَ يُرِيهِمُ ٱللَّهُ أَعْمَٰلَهُمْ حَسَرَٰتٍ عَلَيْهِمْ ۖ وَمَا هُم بِخَٰرِجِينَ مِنَ ٱلنَّارِ ﴿١٦٧﴾

167. Waxayna dhaheen kuwii raacay haddii nala celiyo waan iska bari yeeli lahayn xaggooda say iska kaanna bari yeeleen, saasuuna Alle u tusiyaa camalkooda isagoo qoomammo ku noqon doona (maxay xumida u sameeyeen), kuwo naarta ka bixina ma ahan.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ كُلُواْ مِمَّا فِى ٱلْأَرْضِ حَلَٰلًا طَيِّبًا وَلَا تَتَّبِعُواْ خُطُوَٰتِ ٱلشَّيْطَٰنِ ۚ إِنَّهُۥ لَكُمْ عَدُوٌّ مُّبِينٌ ﴿١٦٨﴾

168. Dadoow cuna waxa dhulka ku sugan kiisa xalaasha fiican ah hana raacina waddooyinka sheydaanka illeen cadaw cad buu idiin yahay.

إِنَّمَا يَأْمُرُكُم بِٱلسُّوٓءِ وَٱلْفَحْشَآءِ وَأَن تَقُولُواْ عَلَى ٱللَّهِ مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿١٦٩﴾

169. Wuxuuna idin fari uun xumaan iyo macsiyo iyo inaad ku sheegtaan Alle waxaydaan ogayn.

Alle ayaa jacayl xaq ah mudan, mana habboona in sida Alle wax kale loo jeclaado, qiyaamadana way iska bari yeeli madaxdii kuway ku hoggaaminayeen xumaanta, xidhiidhkoodiina wuu go'i, calaacal iyo qoomammana wax ma tarayso iyo yaa i celiya aan iska bari yeelee say isaga kaanno bari yeeleen. Dadkuna waa inay xalaasha cunaan, waxa shaydaanku farina ayan raacin illeen waa cadow xumaan farayee, waxaa sugnaatay in Sacad bini Abii Waqaas

ku yidhi Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): Alle ii bari inuu ducadayda aqbalo, markaasuu ku yidhi: cunnadaadu xalaal ha noqoto ducadaada waa la aqbaliye. **[Al-Baqarah: 165-169].**

وَإِذَا قِيلَ لَهُمُ ٱتَّبِعُواْ مَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ قَالُواْ بَلْ نَتَّبِعُ مَآ أَلْفَيْنَا عَلَيْهِ ءَابَآءَنَآ ۚ أَوَلَوْ كَانَ ءَابَآؤُهُمْ لَا يَعْقِلُونَ شَيْـًٔا وَلَا يَهْتَدُونَ ﴿١٧٠﴾

170. Marka lagu dhaho gaalada raaca wuxuu soo dajiyey Alle, waxay dhihi saas ma aha ee waxaannu raaci waxaan ka hellay aabbayowganno (oo caabudi) oo hadday yihiin aabbayowgood kuwaan wax kasayn hanuunsanaynna (miyey raaci).

وَمَثَلُ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ كَمَثَلِ ٱلَّذِى يَنْعِقُ بِمَا لَا يَسْمَعُ إِلَّا دُعَآءً وَنِدَآءً ۚ صُمٌّۢ بُكْمٌ عُمْىٌ فَهُمْ لَا يَعْقِلُونَ ﴿١٧١﴾

171. Waxay la mid yihiin kuwii gaaloobay mid u dhawaaqay waxaan wax maqlayn, kasaynna qaylada iyo dhawaaqa mooyee, waxna ma maqlaan, mana hadlaan, waxna ma arkaan, waxna ma kasaan.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ كُلُواْ مِن طَيِّبَـٰتِ مَا رَزَقْنَـٰكُمْ وَٱشْكُرُواْ لِلَّهِ إِن كُنتُمْ إِيَّاهُ تَعْبُدُونَ ﴿١٧٢﴾

172. Kuwa xaqa rumeeyow wax ka cuna wanaaggaan idinku arzuqnay, kuna mahdiya Alle haddaad tihiin kuwo isaga caabudi.

إِنَّمَا حَرَّمَ عَلَيْكُمُ ٱلْمَيْتَةَ وَٱلدَّمَ وَلَحْمَ ٱلْخِنزِيرِ وَمَآ أُهِلَّ بِهِۦ لِغَيْرِ ٱللَّهِ ۖ فَمَنِ ٱضْطُرَّ غَيْرَ بَاغٍ وَلَا عَادٍ فَلَآ إِثْمَ عَلَيْهِ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٧٣﴾

173. Wuxuu uun idinka reebay bakhtiga, dhiigga, hilibka doofaarka iyo wixii Alle magiciisa waxaan ahayn lagu gawraco, ruuxiise aad ugu dhibaatooda (xalaalna aan heleynin) oon xadgudbin dulmina galin korkiisa dambi ma saarra (inuu) wax ka cuno, Alle na waa dambi dhaaf badane naxariis badan.

Xaqa in la raaco yaa habboon ee ma aha in aabbe iyo cid kale midna xumaan lagu raaco, oo lala mid noqdo xoolo loo dhawaaqi oo kale oo xaqdiid la noqdo, Alle na wax buu reebay in la cuno, waxna wuu xalaaleeyey, ee waa in la cuno xalaasha laguna mahadiyo Alle, lagana fogaado bakhtiga, doofaarka, dhiigga, waxaan magaca Alle kaliya lagu gawricin, dhibaato iyo baahise waa meesheeda ciddaan xad gudbin, xadiithna waxaa ku sugnaaday: Alle waa wanaagsane, waxaan wanaag ahaynna ma aqbalo, wuxuuna faray mu'miniinta wuxuu faray rasuulladii... **[Al-Baqarah: 170-173].**

إِنَّ ٱلَّذِينَ يَكۡتُمُونَ مَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ مِنَ ٱلۡكِتَٰبِ وَيَشۡتَرُونَ بِهِۦ ثَمَنٗا قَلِيلًا أُوْلَٰٓئِكَ مَا يَأۡكُلُونَ فِي بُطُونِهِمۡ إِلَّا ٱلنَّارَ وَلَا يُكَلِّمُهُمُ ٱللَّهُ يَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِ وَلَا يُزَكِّيهِمۡ وَلَهُمۡ عَذَابٌ أَلِيمٌ ١٧٤

174. Kuwa qariya waxa Alle soo dajiyey oo kitaabka ah (quraanka) kuna gata lacag yar kuwaasi kuma cunayaan (ma galinayaan) calooshooda waxaan naar ahayn, lamana hadlo Alle maalinta qiyaame mana daahiriyo waxayna mudan cadaab daran.

أُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ ٱشۡتَرَوُاْ ٱلضَّلَٰلَةَ بِٱلۡهُدَىٰ وَٱلۡعَذَابَ بِٱلۡمَغۡفِرَةِۚ فَمَآ أَصۡبَرَهُمۡ عَلَى ٱلنَّارِ ١٧٥

175. Kuwaasi waa kuwa ku gatay baadida hanuun, cadaabna dambidhaafid, maxaa uga adkaysi badan naarta.

ذَٰلِكَ بِأَنَّ ٱللَّهَ نَزَّلَ ٱلۡكِتَٰبَ بِٱلۡحَقِّۗ وَإِنَّ ٱلَّذِينَ ٱخۡتَلَفُواْ فِي ٱلۡكِتَٰبِ لَفِي شِقَاقِۭ بَعِيدٖ ١٧٦

176. Arrintaas waxaa ugu wacan in Allaah xaqnimo la soo dejiyey kitaabka, kuwii isku diiday kitaabkana waxay ku sugan yihiin khilaaf fog.

۞ لَّيۡسَ ٱلۡبِرَّ أَن تُوَلُّواْ وُجُوهَكُمۡ قِبَلَ ٱلۡمَشۡرِقِ وَٱلۡمَغۡرِبِ وَلَٰكِنَّ ٱلۡبِرَّ مَنۡ ءَامَنَ بِٱللَّهِ وَٱلۡيَوۡمِ ٱلۡأٓخِرِ وَٱلۡمَلَٰٓئِكَةِ وَٱلۡكِتَٰبِ وَٱلنَّبِيِّـۧنَ وَءَاتَى ٱلۡمَالَ عَلَىٰ حُبِّهِۦ ذَوِي ٱلۡقُرۡبَىٰ وَٱلۡيَتَٰمَىٰ وَٱلۡمَسَٰكِينَ وَٱبۡنَ ٱلسَّبِيلِ وَٱلسَّآئِلِينَ وَفِي ٱلرِّقَابِ وَأَقَامَ ٱلصَّلَوٰةَ

177. Samo falku ma aha inaad wajiga u jeedisaan qorrax ka soo bax iyo qorrax u dhac, laakiin sama fale waa ruuxii rumeeya Alle, qiyaame, malaa'igta, kitaabka (kutubta Alle), Nabiyada, oo siiya xoolaha isagoo jecel qaraabada, agoonta, masaakiinta, masaafirka, kuwa baryootama, fakin qoor, oogana

وَءَاتَى ٱلزَّكَوٰةَ وَٱلْمُوفُونَ بِعَهْدِهِمْ إِذَا عَٰهَدُوا۟ ۖ وَٱلصَّٰبِرِينَ فِى ٱلْبَأْسَآءِ وَٱلضَّرَّآءِ وَحِينَ ٱلْبَأْسِ ۗ أُو۟لَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ صَدَقُوا۟ ۖ وَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْمُتَّقُونَ ﴿١٧٧﴾

salaadda, bixiyana zakada, oofiyana ballankooda, markay ballamaan, samra (adkaystana) waqtiga saboolnimada, jirrada iyo dagaalka, kuwaasina waa kuwa ku run sheegay iimaankooda waana kuwa dhawrsada.

Xaqoo la qariyo ama si xun loo sheego waa arrin daran oo Alle ugu gooddiyey ciddii fasha ciqaab daran iyo cadaab, maxaa yeelay xaqii bay ku gateen adduunyo, hanuunkii iyo dambidhaafkiina baadi iyo cadaab. Marse hadday khilaaf iyo xaqdiid ku sugan yihiin ha u darbadeen cadaab hadday u adkeysan. Sama falkuna ma aha istustus iyo wajigoo la jeediyo, waase in xaqa dhammaantiis la rumeyo, dadkana loo naxariisto, cibaadadana la badiyo, dhibka iyo jahaadka iyo jirradana loo adkeysto iyadoo lagu dadaali sidii laysaga fududayn lahaa, kuwaa saas fala waa kuwa xumaanta ka dhawrsaday.

Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: sadaqo waxaa u fiican inaad bixiso adoo fayow oo ku adag bixinta, yididdiilina hodontinnimo. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim. **[Al-Baqarah: 174-177].**

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ كُتِبَ عَلَيْكُمُ ٱلْقِصَاصُ فِى ٱلْقَتْلَى ۖ ٱلْحُرُّ بِٱلْحُرِّ وَٱلْعَبْدُ بِٱلْعَبْدِ وَٱلْأُنثَىٰ بِٱلْأُنثَىٰ ۚ فَمَنْ عُفِىَ لَهُۥ مِنْ أَخِيهِ شَىْءٌ فَٱتِّبَاعٌۢ بِٱلْمَعْرُوفِ وَأَدَآءٌ إِلَيْهِ بِإِحْسَٰنٍ ۗ ذَٰلِكَ تَخْفِيفٌ مِّن رَّبِّكُمْ وَرَحْمَةٌ ۗ فَمَنِ ٱعْتَدَىٰ بَعْدَ ذَٰلِكَ فَلَهُۥ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١٧٨﴾

178. Kuwa xaqa rumeeyow waxaa laydinku waajibiyey qisaasta dadka la dilo, xurta xur baa loo qisaasan, addoonkana addoon, haweeneydana haweeney, (aayadda maa'ida waxay caddeysay in ragga iyo haweenka la isu qisaasayo) ruuxiise looga cafiyey walaalkiis (xaggiisa) wax, waxaa saaran (kii qisaaska cafiyay) inuu si fiican u raaco isna si fiican loogu gudo, taasina waa fudayd xagga Alle iyo naxariis, ruuxiise xadgudba intaas ka dib wuxuu mudan cadaab daran.

وَلَكُمْ فِي ٱلْقِصَاصِ حَيَوٰةٌ يَـٰٓأُو۟لِى ٱلْأَلْبَـٰبِ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ ﴿١٧٩﴾

179. Waxaa idinku sugan qisaasta nolol dadka wax garadka ahow waxaadna mudan tihiin inaad dhawrsataan.

كُتِبَ عَلَيْكُمْ إِذَا حَضَرَ أَحَدَكُمُ ٱلْمَوْتُ إِن تَرَكَ خَيْرًا ٱلْوَصِيَّةُ لِلْوَٰلِدَيْنِ وَٱلْأَقْرَبِينَ بِٱلْمَعْرُوفِ ۖ حَقًّا عَلَى ٱلْمُتَّقِينَ ﴿١٨٠﴾

180. Waxaa laydinku waajibiyey markaad dhimanaysaan haddaad ka tagaysaan xoolo dardaaranka waalidaynka iyo qaraabada si wanaagsan, xaq bayna ku tahay kuwa dhawrsada. (Waxayna taasi ahayd intii aanay soo degin aayadihii lugu caddeeyay dhaxalka)

فَمَنۢ بَدَّلَهُۥ بَعْدَ مَا سَمِعَهُۥ فَإِنَّمَآ إِثْمُهُۥ عَلَى ٱلَّذِينَ يُبَدِّلُونَهُۥٓ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿١٨١﴾

181. Ruuxiise baddala dardaaranka intuu maqlay ka dib dambigu wuxuu saaran yahay uun kuwa wax baddala, Alle na waa maqle og.

فَمَنْ خَافَ مِن مُّوصٍ جَنَفًا أَوْ إِثْمًا فَأَصْلَحَ بَيْنَهُمْ فَلَآ إِثْمَ عَلَيْهِ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٨٢﴾

182. Ruuxii uga cabsada dardaarme iilasho ama dambi oo hagaajiya dhexdoda, korkiisa danbi ma saarra, Alle na waa dambi dhaaf badane naxariis badan.

Alle wuxuu soo dajiyay sharci wanaag badan si loogu dhaqmo. Hasa yeeshee dadku isku mid ma aha, qaar waxay ku dhaqmi sharcigaas, qaarna in xoog iyo toosin la toosiyo mooyee ma hagaagaan saas darteed ciddii cid kale si gardarra ah u disha waa in iyana la dilaa si nabad iyo nolol loo helo haddii layska cafiyo si heshiiis ah waa in si fiican laysu xaqmariyaa, waa naxariis Alle. Tan kale waa in ruuxu geeri ka hor xuquuqda ku caddeeyaa dardaaran, si caddaalad ah, markhaatiguna ka run sheegaa, waxna baddalin, wixii gaf ahna saxaa isagoon xumaan iyo danbi galin. **[Al-Baqarah: 178-182].**

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ كُتِبَ عَلَيْكُمُ ٱلصِّيَامُ كَمَا كُتِبَ عَلَى ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ ﴿١٨٣﴾

183. Kuwa xaqa rumeeyow waxaa laydinku waajibiyay soonka sidii loogu waajibiyey kuwii idinka horreeyey si aad u dhawrsataan.

أَيَّامًا مَّعْدُودَٰتٍ ۚ فَمَن كَانَ مِنكُم
مَّرِيضًا أَوْ عَلَىٰ سَفَرٍ فَعِدَّةٌ مِّنْ أَيَّامٍ
أُخَرَ ۚ وَعَلَى ٱلَّذِينَ يُطِيقُونَهُۥ فِدْيَةٌ طَعَامُ
مِسْكِينٍ ۖ فَمَن تَطَوَّعَ خَيْرًا فَهُوَ خَيْرٌ
لَّهُۥ ۚ وَأَن تَصُومُوا۟ خَيْرٌ لَّكُمْ إِن كُنتُمْ
تَعْلَمُونَ ﴿١٨٤﴾

184. Waa maalmo tirsan ee ruuxii idinka mid ah oo buka ama safar ah waxaa korkiisa ah ayaamo kale (soonkood) kuwa uu dhibina waxay bixin "quudin" miskiin, ruuxii badsada (khayrkana) saasaa u fiican, inaad soontaan yaana idiin khayr badan haddaad tihiin kuwo wax og.

شَهْرُ رَمَضَانَ ٱلَّذِىٓ أُنزِلَ فِيهِ ٱلْقُرْءَانُ
هُدًى لِّلنَّاسِ وَبَيِّنَٰتٍ مِّنَ ٱلْهُدَىٰ
وَٱلْفُرْقَانِ ۚ فَمَن شَهِدَ مِنكُمُ ٱلشَّهْرَ
فَلْيَصُمْهُ ۖ وَمَن كَانَ مَرِيضًا أَوْ عَلَىٰ
سَفَرٍ فَعِدَّةٌ مِّنْ أَيَّامٍ أُخَرَ ۗ يُرِيدُ ٱللَّهُ
بِكُمُ ٱلْيُسْرَ وَلَا يُرِيدُ بِكُمُ ٱلْعُسْرَ
وَلِتُكْمِلُوا۟ ٱلْعِدَّةَ وَلِتُكَبِّرُوا۟ ٱللَّهَ عَلَىٰ مَا
هَدَىٰكُمْ وَلَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿١٨٥﴾

185. Waa bisha soon ee la soo dajiyey dhexdeeda quraanka, isagoo hanuun dadka u ah, iyo caddayn hanuun iyo kala bixin (xaqa iyo baadhilka) ee ruuxii jooga (nagi) ha soomo, ruuxiise buka ama safar ah waxaa saaran maalmo kale, wuxuu idinla dooni Alle fudayd ee idin lama doonayo culays, waana inaad dhammaystirtaan tirada, wayneysaanna Alle wuxuu idinku hanuuniyey, waxaadna u dhawdihiin, mudan tihiin, inaad mahadisaan Alle.

Tiirarka waaweyn ee islaamka waxaa ka mid ah soonka oo Alle waajibiyay siduu ummadihii hore ugu waajibiyey si xumaanta looga dhawrsado, waana maalmo tirsan oo soddomeeye ama wax ka yar ah, ciddii kartana waa ku waajib oo qaangaadh ah oo cudur iyo safar midna hayn, soonku waa bishii quraanka - oo hanuun iyo caddayno ah - la soo dajiyay. Alle na dhib inalama doonayo ee fudayd buu inala rabaa iyo inaan dhammayno soonka, Alle na waynayno, kuna mahdinno hanuunkiisa.

Rasuulku wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): ruuxii u sooma (bisha) soon rumeyn Alle iyo ajri kasab waxaa loo dhaafaa wuxuu hor marsaday oo dambi ah. Tan kale wuxuu ku tusin soonku sinnaan iyo caddaalad iyo in laysu naxariisto. **[Al-Baqarah: 183-185].**

186. Hadday ku warsadaan Nabiyow addoommadu xaggayga anigu waan dhawahay waana ajiibaa (aqbalaa) baryada markay i baryaan, ee ha i maqleen iyaguna hana i rumeeyeen si ay u hanuunaan.

وَإِذَا سَأَلَكَ عِبَادِى عَنِّى فَإِنِّى
قَرِيبٌ ۖ أُجِيبُ دَعْوَةَ ٱلدَّاعِ إِذَا دَعَانِ ۖ
فَلْيَسْتَجِيبُوا۟ لِى وَلْيُؤْمِنُوا۟ بِى لَعَلَّهُمْ
يَرْشُدُونَ ﴿١٨٦﴾

187. Waxaa laydiin banneeyey inaad habeenka soonka is aragtaan haweenka, maxaa yeelay dhar (asturaad) bay idiin yihiin, idinkuna dhar (asturaad) baad u tihiin, Alle na wuxuu ogaaday inaad khayaamayseen naftiinna. Wuuna idinka toobad aqbalay idinna cafiyey ee hadda u taga haweenkiinna kana doona waxa Alle idiinku qoray, cuna oo cabbana intuu ka muuqdo liilanka cadi (waagu) kan madow aroortii, dhammeeyana soonka tan iyo habeenka, hana u tagina haweenka idinkoo ku nagi masaajidda, taasina waa xuduudda (soohdinta) Alle ee haw dhawaannina, saasuuna ugu caddayn Alle aayaadkiisa dadka si ay u dhawrsadaan.

أُحِلَّ لَكُمْ لَيْلَةَ ٱلصِّيَامِ ٱلرَّفَثُ إِلَىٰ
نِسَآئِكُمْ ۚ هُنَّ لِبَاسٌ لَّكُمْ وَأَنتُمْ
لِبَاسٌ لَّهُنَّ ۗ عَلِمَ ٱللَّهُ أَنَّكُمْ كُنتُمْ
تَخْتَانُونَ أَنفُسَكُمْ فَتَابَ عَلَيْكُمْ
وَعَفَا عَنكُمْ ۖ فَٱلْـَٰٔنَ بَـٰشِرُوهُنَّ وَٱبْتَغُوا۟
مَا كَتَبَ ٱللَّهُ لَكُمْ ۚ وَكُلُوا۟ وَٱشْرَبُوا۟
حَتَّىٰ يَتَبَيَّنَ لَكُمُ ٱلْخَيْطُ ٱلْأَبْيَضُ مِنَ
ٱلْخَيْطِ ٱلْأَسْوَدِ مِنَ ٱلْفَجْرِ ۖ ثُمَّ أَتِمُّوا۟
ٱلصِّيَامَ إِلَى ٱلَّيْلِ ۚ وَلَا تُبَـٰشِرُوهُنَّ وَأَنتُمْ
عَـٰكِفُونَ فِى ٱلْمَسَـٰجِدِ ۗ تِلْكَ حُدُودُ ٱللَّهِ
فَلَا تَقْرَبُوهَا ۗ كَذَٰلِكَ يُبَيِّنُ ٱللَّهُ ءَايَـٰتِهِۦ
لِلنَّاسِ لَعَلَّهُمْ يَتَّقُونَ ﴿١٨٧﴾

188. Hana ku cunina xoolihiinna dhexdiinna si baadhil (xaq darri) ah idinkoo u dhiibi (laaluush) xukaamta si aad ugu cuntaan qayb ka mid ah xoolaha dadka si xaaraan ah idinkoo og.

وَلَا تَأْكُلُوٓا۟ أَمْوَٰلَكُم بَيْنَكُم
بِٱلْبَـٰطِلِ وَتُدْلُوا۟ بِهَآ إِلَى ٱلْحُكَّامِ
لِتَأْكُلُوا۟ فَرِيقًا مِّنْ أَمْوَٰلِ ٱلنَّاسِ
بِٱلْإِثْمِ وَأَنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿١٨٨﴾

Alleheen waa inoo dhaw yahay wuuna maqli ducada iyo baryada addoommadiisa mu'mininta ah, wuuna aqbalaa, ee waa in iyaguna Allahood adeecaan si dhab ahna u caabudaan, isagana baryaan. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Alle waa ka xishoodaa in addoon fidiyey gacmihiisa isagoo baryi inuu hoojiyo, tan kale soonka habeenkii ma reebbana inay is arkaan laba is qabta, maalintiise way reebban tahay bisha soon inay is hunguriyeeyaan, waxaa kaloo la reebay inay is arkaan iyagoo masaajidda ku nagi, waxaasi waa xuduudda Alle waana inaan loo dhawaan. Allana wuu u caddeyn dadka aayaadkiisa doonis uu doonayo inay dhowrsadaan darteed. Xoolaha dadka kalana waa inaan xaq darro iyo madaxda oo lala kaashado lagu cunin, waana reebban tahay in lagu cuno laaluush, khayaamo, been iyo wadda kasta oo xaaraan ah iyadoo la og yahay. Nabigaa yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) macnahaas. **[Al-Baqarah: 186-188].**

189. Waxay ku warsan Nabiyow bilaha ee waxaad dhahdaa waqtiyayn (muddayn) bay u tahay dadka iyo xajka, mana aha samo falku inaad ugaga timaaddaan guryaha xagga dhabarka ee sama fale waa ruuxii dhawrsada, ugagana imaadda guryaha albaabada, kana dhawrsada Alle waxaad u dhawdihiin inaad liibaantaane.

190. Kula dagaallama jidka Alle kuwa idinla dagaallama, hana xad gudbina, Alle ma jecla kuwa xadgudbee.

191. Ku dila meeshaad ka heshaanba, kana bixiya meeshey idin ka bixiyeen, gaalnimaa ka daran dilka, ha kula dagaallamina masaajidka xurmaysan agtiisa intay idinkula dagaallamaan dhexdiisa, haddayse idinkula dagaalaan la dagaallama, saasaa abaalka gaalada ahe.

* يَسْـَٔلُونَكَ عَنِ ٱلْأَهِلَّةِ ۖ قُلْ هِىَ
مَوَٰقِيتُ لِلنَّاسِ وَٱلْحَجِّ ۗ وَلَيْسَ ٱلْبِرُّ
بِأَن تَأْتُوا۟ ٱلْبُيُوتَ مِن ظُهُورِهَا وَلَٰكِنَّ
ٱلْبِرَّ مَنِ ٱتَّقَىٰ ۗ وَأْتُوا۟ ٱلْبُيُوتَ مِنْ أَبْوَٰبِهَا ۚ
وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿١٨٩﴾

وَقَٰتِلُوا۟ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ ٱلَّذِينَ
يُقَٰتِلُونَكُمْ وَلَا تَعْتَدُوٓا۟ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَا
يُحِبُّ ٱلْمُعْتَدِينَ ﴿١٩٠﴾
وَٱقْتُلُوهُمْ حَيْثُ ثَقِفْتُمُوهُمْ وَأَخْرِجُوهُم
مِّنْ حَيْثُ أَخْرَجُوكُمْ ۚ وَٱلْفِتْنَةُ أَشَدُّ مِنَ
ٱلْقَتْلِ ۚ وَلَا تُقَٰتِلُوهُمْ عِندَ ٱلْمَسْجِدِ
ٱلْحَرَامِ حَتَّىٰ يُقَٰتِلُوكُمْ فِيهِ ۖ فَإِن قَٰتَلُوكُمْ
فَٱقْتُلُوهُمْ ۗ كَذَٰلِكَ جَزَآءُ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿١٩١﴾

فَإِنِ ٱنتَهَوْا۟ فَإِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٩٢﴾

192. Haddayse reebtoomaan Alle waa dhaafid badane naxariis badan.

وَقَٰتِلُوهُمْ حَتَّىٰ لَا تَكُونَ فِتْنَةٌ وَيَكُونَ ٱلدِّينُ لِلَّهِ ۖ فَإِنِ ٱنتَهَوْا۟ فَلَا عُدْوَٰنَ إِلَّا عَلَى ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿١٩٣﴾

193. La dagaallama intaan la helin gaalnimo, oo diintu u ahaan Alle, hadday reebtoomaan lalama collaytamo cidaan xadgudbayn.

Bishu waa calaamaadka Alle lagu aqoonsado, soonka iyo khayr badan, samo falla ma aha in guryaha dhabarka looga yimaado sidii jaahilintii, ee sama fal waa dhawrsanaan, ee uga imaadda guryaha albaabbadooda, Allana ka dhawrsada si aad u liibaantaan, kulana dirira jidka Alle kuwa idinkula dirira, hana xadgudbina Alle ma jecla kuwa xadgudba, lana dirira meeshaad ka heshaanba, cadowga gaalada, kana bixiya meeshay idinka bixiyeen, gaalnimadaa ka daran dilkee, hana kula dagaallamina masaajidka xurmeysan agtiisa intay idinkula dagaallamaan dhexdiisa, haddayse idinkula dagaallamaan la dagaallama, saasaana abaalka gaalada ahe, haddayse joogsadaan Alle waa dambi dhaaf badane naxariis badan, dagaallama intaan gaalnimo iyo xumaan laga helin dhulka, diintuna Alle u ahaato, hadday joogsadaan waxaan daalim ahayn lalama collaytamo, ruuxii u dagaallama in kalimadda Alle (islaamku) sarreeyo unbaa jidka Alle ku toosan. Waa xadiith Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee). **[Al-Baqarah: 189-193].**

ٱلشَّهْرُ ٱلْحَرَامُ بِٱلشَّهْرِ ٱلْحَرَامِ وَٱلْحُرُمَٰتُ قِصَاصٌ ۚ فَمَنِ ٱعْتَدَىٰ عَلَيْكُمْ فَٱعْتَدُوا۟ عَلَيْهِ بِمِثْلِ مَا ٱعْتَدَىٰ عَلَيْكُمْ ۚ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَٱعْلَمُوٓا۟ أَنَّ ٱللَّهَ مَعَ ٱلْمُتَّقِينَ ﴿١٩٤﴾

194. Bisha xurmaysan (dagaalkeeda) waxaa laga horgayn bisha xurmaysan, waxyaalaha xurmaysanna qisaas baa ah, ee ciddii idin ku xadgudubta ku xadgudba "ku abaal mariya" intuu idinku xadgudbay wax la eg, Allana ka dhawrsada, ogaadana in Alle la jiro kuwa dhawrsada.

وَأَنفِقُوا۟ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ وَلَا تُلْقُوا۟ بِأَيْدِيكُمْ إِلَى ٱلتَّهْلُكَةِ ۛ وَأَحْسِنُوٓا۟ ۛ إِنَّ ٱللَّهَ يُحِبُّ ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿١٩٥﴾

195. Ku nafaqeeya (ku bixiya wax) jidka Alle, hana ku tuurina gacmihiinna halaag (wax bixin la'aan) wanaagna fala, Alle wuxuu jecel yahay kuwa wanaagga fala.

196. Dhammaystirana xajka iyo cumrada, haddii laydinka horjoogsadana waxaa idin saaran wixii fududaada oo hadya ah (inaad gawracdaan) hana xiirina madaxiinna intay ka gaadhi hadyada meesheeda, ruuxii idinka mid ah oo buko ama wax dhibi madaxa kaga jiraan ama kaga yaallaan, waxaa saaran fidyo (furasho) soon ah, ama sadaqo, ama gawrac, markaad aammin noqotaan ruuxii cumro iyo xajka ku raaxaysta (kulmiya) waxaa saaran wixii fududaada oo hadya ah (gawrac), ruuxaanse helin ha ku soomo saddex maalmood xajka iyo toddoba markuu ku noqdo gurigiisii, taasina waa toban buuxda, waase ruuxaan degganayn masaajidka la xurmeeyey (Maka), ka dhawrsada Alle, ogaadana in Alle yahay kay daran tahay ciqaabtiisu.

وَأَتِمُّوا۟ ٱلْحَجَّ وَٱلْعُمْرَةَ لِلَّهِ ۚ فَإِنْ أُحْصِرْتُمْ
فَمَا ٱسْتَيْسَرَ مِنَ ٱلْهَدْىِ ۖ وَلَا تَحْلِقُوا۟
رُءُوسَكُمْ حَتَّىٰ يَبْلُغَ ٱلْهَدْىُ مَحِلَّهُۥ ۚ
فَمَن كَانَ مِنكُم مَّرِيضًا أَوْ بِهِۦٓ أَذًى
مِّن رَّأْسِهِۦ فَفِدْيَةٌ مِّن صِيَامٍ أَوْ صَدَقَةٍ
أَوْ نُسُكٍ ۚ فَإِذَآ أَمِنتُمْ فَمَن تَمَتَّعَ بِٱلْعُمْرَةِ
إِلَى ٱلْحَجِّ فَمَا ٱسْتَيْسَرَ مِنَ ٱلْهَدْىِ ۚ فَمَن
لَّمْ يَجِدْ فَصِيَامُ ثَلَٰثَةِ أَيَّامٍ فِى ٱلْحَجِّ
وَسَبْعَةٍ إِذَا رَجَعْتُمْ ۗ تِلْكَ عَشَرَةٌ كَامِلَةٌ ۗ
ذَٰلِكَ لِمَن لَّمْ يَكُنْ أَهْلُهُۥ حَاضِرِى
ٱلْمَسْجِدِ ٱلْحَرَامِ ۚ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَٱعْلَمُوٓا۟
أَنَّ ٱللَّهَ شَدِيدُ ٱلْعِقَابِ ﴿١٩٦﴾

Dagaalka xaq darro waqti walba waa reebban yahay bisha xurmada lehna waa ka sii daran yahay, hadday gaaladu inalala dagaallamaan waa inaan iska celinnaa, ciddii muslimka ku xadgudubtana waa in la abaal mariyo, iyagoon lagu tacaddiyeyn Allana laga dhawrsan, lana ogaan in Alle la jiro kuwa dhawrsada, waana in wax la bixiyo oon bakhaylnimo laysku halaagin, xajka iyo cumradana si fiican loo guto, haddiise laguu diido intaad xarmatay waxaad gawrici xoolo madaxana lama xiiro inta hadyadu meesheeda ka gaadhi, ruuxiise madaxa boogu dhibi ama injiri kaga jirto wuu xiiri, oo fidyana samayn, ruuxiise raaxeeysta cumrada iyo xajka dhexdooda waxaa laga rabaa wixii u fududaada oo hadya ah, hadduusan karinna soon toban bari ah, saddex xajka dhexdiisa, toddobana markuu noqdo, waana ruuxaan Maka dagganayn,

waana in Alle laga dhawrsado, ciqaabtiisu waa daran tahay, horjoogsiga la sheegina waa sidii Nabiga iyo asaxaabtiisa lagu sameeyey sannadkii lixaad ee xudeybiyo. **[Al-Baqarah: 194-196].**

197. Xajku waa bilo la yaqaan, ee ruuxii isku waajibiya xajka (oo xaj xirta) bilahaas gudahooda, isutagid, fisqi iyo muran ma jiro xajka dhexdiisa, waxaad fashaan oo khayr ah wuu ogaan Alle, ee sahay qaata, sahay tan u khayrbadanna waa dhawrsashada, ee iga dhawrsada kuwa caqliga lahow.

ٱلْحَجُّ أَشْهُرٌ مَّعْلُومَٰتٌ ۚ فَمَن فَرَضَ فِيهِنَّ ٱلْحَجَّ فَلَا رَفَثَ وَلَا فُسُوقَ وَلَا جِدَالَ فِى ٱلْحَجِّ ۗ وَمَا تَفْعَلُوا۟ مِنْ خَيْرٍ يَعْلَمْهُ ٱللَّهُ ۗ وَتَزَوَّدُوا۟ فَإِنَّ خَيْرَ ٱلزَّادِ ٱلتَّقْوَىٰ ۚ وَٱتَّقُونِ يَٰٓأُو۟لِى ٱلْأَلْبَٰبِ ﴿١٩٧﴾

198. Korkiinna wax dhib ah ma aha haddaad dalabtaan fadliga Allihiin (ganacsi) ee markaad ka soo gadoontaan carrafo ku xusa Alle mashcarulxaraam agtiisa, una xusa siduu idiin hanuuniyey, waxaadna ahaydeen xaqa hortiis kuwa dhunsan.

لَيْسَ عَلَيْكُمْ جُنَاحٌ أَن تَبْتَغُوا۟ فَضْلًا مِّن رَّبِّكُمْ ۚ فَإِذَآ أَفَضْتُم مِّنْ عَرَفَٰتٍ فَٱذْكُرُوا۟ ٱللَّهَ عِندَ ٱلْمَشْعَرِ ٱلْحَرَامِ ۖ وَٱذْكُرُوهُ كَمَا هَدَىٰكُمْ وَإِن كُنتُم مِّن قَبْلِهِۦ لَمِنَ ٱلضَّآلِّينَ ﴿١٩٨﴾

199. Markaas ka gaddooma meesha dadku ka gaddoomi dambidhaafna waydiista Alle, ilaahay waa dambi dhaafe naxariistee.

ثُمَّ أَفِيضُوا۟ مِنْ حَيْثُ أَفَاضَ ٱلنَّاسُ وَٱسْتَغْفِرُوا۟ ٱللَّهَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٩٩﴾

Bilaha xajka waa soonfur sidataal iyo tobanka arafo (dulxija) ciddii xarmata xajna waa ka reebban tahay inay xaaskiisa is arkaan (isutagid), sidoo kale waa reebban yihiin xumaan iyo dambi iyo fisqi, inkastooy xumaantu reebban tahay had iyo jeer haddana way ka sii daran tahay waqtiga xajka, murankuna waa reebban yahay xajka, waana in la sahay qaato iyadoo la og yahay in cabsida Alle sahay ugu fiican tahay, ceebna ma aha in ganacsi xalaal ah lagu sameeyo xajka, waana Alle in aad loo xusaa kibirka iyo islawaynidana layska jiro, waxaana sugnaatay: ruuxii xajiya oon tagid iyo fisqi la imaan wuxuu noqdaa isagoo dambi ka ah siday hooyadii ku dhashay, waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim. **[Al-Baqarah: 197-199].**

فَإِذَا قَضَيْتُم مَّنَاسِكَكُمْ فَٱذْكُرُواْ ٱللَّهَ كَذِكْرِكُمْ ءَابَآءَكُمْ أَوْ أَشَدَّ ذِكْرًا ۗ فَمِنَ ٱلنَّاسِ مَن يَقُولُ رَبَّنَآ ءَاتِنَا فِى ٱلدُّنْيَا وَمَا لَهُۥ فِى ٱلْءَاخِرَةِ مِنْ خَلَٰقٍ ﴿٢٠٠﴾

200. Markaad gudataan camalkiinna xusa Alle saad u xustaan aabayowgiin ama si ka daran u xusa, dadka waxaa ka mid ah kuwo dhihi Allow na sii adduunka wanaag, aan kuna lahayn aakhiro qayb.

وَمِنْهُم مَّن يَقُولُ رَبَّنَآ ءَاتِنَا فِى ٱلدُّنْيَا حَسَنَةً وَفِى ٱلْءَاخِرَةِ حَسَنَةً وَقِنَا عَذَابَ ٱلنَّارِ ﴿٢٠١﴾

201. Waxaana ka mid ah dadka kuwo dhihi Allow na sii adduunka wanaag, aakhirana nasii wanaag, nagana dheeree cadaabka naarta.

أُوْلَٰٓئِكَ لَهُمْ نَصِيبٌ مِّمَّا كَسَبُواْ ۚ وَٱللَّهُ سَرِيعُ ٱلْحِسَابِ ﴿٢٠٢﴾

202. Kuwaasi waxay mudan qayb waxay kasbadeen, Allana waa deg degtaa xisaabtiisu.

* وَٱذْكُرُواْ ٱللَّهَ فِىٓ أَيَّامٍ مَّعْدُودَٰتٍ ۚ فَمَن تَعَجَّلَ فِى يَوْمَيْنِ فَلَآ إِثْمَ عَلَيْهِ وَمَن تَأَخَّرَ فَلَآ إِثْمَ عَلَيْهِ ۖ لِمَنِ ٱتَّقَىٰ ۗ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ وَٱعْلَمُوٓاْ أَنَّكُمْ إِلَيْهِ تُحْشَرُونَ ﴿٢٠٣﴾

203. Xusa Alle maalmo tirsan (saddex maalmood iidda carafo dabadeed), ciddiise dag dagta laba maalmood dhexdood ma saarra dambi korkiisa, (oo waa loo dhaafaa) ruuxii dib marana ma saarra dambi korkiisa labaduna waa hadday xajka ku dhawrsadaan, ka dhawrsada Alle, ogaadana in xaggiisa laydiin soo kulmin.

Xusidda Alle yaa wax walba ka horreeysa kana wanaagsan, waana in Alle wanaagga aakhiro iyo adduunba la waydiistaa een adduun uun lagu gaabsan, illeen Allaa wax walba xisaabiyee waana in Alle aad loo xuso ayaamaha ciidda arrafo ka dambeeya. Waxaa sugnaatay inuu Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ku ducaysan jiray Allow na sii adduunka wanaag aakhirana wanaag, nagana dhawr cadaabka naarta. **[Al-Baqarah: 200-203].**

وَمِنَ ٱلنَّاسِ مَن يُعْجِبُكَ قَوْلُهُۥ فِى ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا وَيُشْهِدُ ٱللَّهَ عَلَىٰ مَا فِى قَلْبِهِۦ وَهُوَ أَلَدُّ ٱلْخِصَامِ ﴿٢٠٤﴾

204. Dadka waxaa ka mid ah mid ku yaab galin hadalkiisu noloshan adduun, maragna gashay Alle waxa qalbigiisa ku sugan, isagoo dood badan.

وَإِذَا تَوَلَّىٰ سَعَىٰ فِي ٱلْأَرْضِ لِيُفْسِدَ فِيهَا وَيُهْلِكَ ٱلْحَرْثَ وَٱلنَّسْلَ ۗ وَٱللَّهُ لَا يُحِبُّ ٱلْفَسَادَ ﴿٢٠٥﴾

205. Markuu jeedsadana, socda dhulka fasaad dartii iyo inuu halligo beeraha iyo faracaba. Alle na ma jecla fasaadka.

وَإِذَا قِيلَ لَهُ ٱتَّقِ ٱللَّهَ أَخَذَتْهُ ٱلْعِزَّةُ بِٱلْإِثْمِ ۚ فَحَسْبُهُۥ جَهَنَّمُ ۖ وَلَبِئْسَ ٱلْمِهَادُ ﴿٢٠٦﴾

206. Marka loo dhoho ka dhawrso Alle na waxa qabata isla weyni dambi dartiis, waxaa ku filan jahannamo iyadaana u xun gogol.

وَمِنَ ٱلنَّاسِ مَن يَشْرِى نَفْسَهُ ٱبْتِغَآءَ مَرْضَاتِ ٱللَّهِ ۗ وَٱللَّهُ رَءُوفٌۢ بِٱلْعِبَادِ ﴿٢٠٧﴾

207. Dadkana waxaa ka mid ah mid gadi naftiisa, dalab raalli ahaanshaha Alle dartii, Allana waa u naxariistaha addoommada.

Hadal macaan iyo uur xun oo is khilaafsan waa calaamadaha dadka xun ee fasaad iyo xumaan la socda dhulka, saas oo kale doodda, muran badnida iyo xaqa iska kibrinta. Waase in lagu dadaalo raalli ahaanshaha Alle. Saciid waxaa laga wariyay: kutubta qaarkeed waxaa ku sugan addoommada waxaa ka mid ah kuwa carrabkoodu ka macaan yahay malab, qalbigooduna ka khadhaadh yahay dacar. Waxay xidheen maryo suuf ka jilicsan, kuna gatay adduunka diinta, Allana wuxuu yidhi waynideeydaan ku dhaartee waaxaan ku diri fidmo wareerisa markaasuu yidhi: Maxamad binu Kacab waxaa laga heli quraanka, markaasuu siciid yidhi: xaggee? Wuxuuna akhriyay: dadka waxaa kamid ah... **[Al-Baqarah: 204-207].**

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱدْخُلُواْ فِي ٱلسِّلْمِ كَآفَّةً وَلَا تَتَّبِعُواْ خُطُوَٰتِ ٱلشَّيْطَٰنِ ۚ إِنَّهُۥ لَكُمْ عَدُوٌّ مُّبِينٌ ﴿٢٠٨﴾

208. Kuwa xaqa rumeeyow u gala islaamka dhammaan (kuna camal fala) hana raacina waddooyinka shaydaanka, wuxuu idiin yahay col cade.

فَإِن زَلَلْتُم مِّنۢ بَعْدِ مَا جَآءَتْكُمُ ٱلْبَيِّنَٰتُ فَٱعْلَمُوٓاْ أَنَّ ٱللَّهَ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٢٠٩﴾

209. Haddaad simbiriiraxataan intuu idiin yimid xujooyin ogaada in Alle yahay adkaade fal san.

هَلْ يَنظُرُونَ إِلَّآ أَن يَأْتِيَهُمُ ٱللَّهُ فِي ظُلَلٍ مِّنَ ٱلْغَمَامِ وَٱلْمَلَٰٓئِكَةُ وَقُضِيَ ٱلْأَمْرُ ۚ وَإِلَى ٱللَّهِ تُرْجَعُ ٱلْأُمُورُ ﴿٢١٠﴾

210. Miyey sugi inuu Allaah ugu yimaaddo daruuro dhexdood mooyee, iyo malaa'igtu, lana xukumo amarka, xagga Allaana loo celin umuuraha.

سَلۡ بَنِيٓ إِسۡرَٰٓءِيلَ كَمۡ ءَاتَيۡنَٰهُم مِّنۡ ءَايَةم بَيِّنَةٖۗ وَمَن يُبَدِّلۡ نِعۡمَةَ ٱللَّهِ مِنۢ بَعۡدِ مَا جَآءَتۡهُ فَإِنَّ ٱللَّهَ شَدِيدُ ٱلۡعِقَابِ ٢١١

211. Waydii banii israa'iil immisaan siinnay aayad cad, ciddii badasha nicmada Alle intay u timid ka dib, Alle ciqaabtiisu waa ku daran tahay.

زُيِّنَ لِلَّذِينَ كَفَرُواْ ٱلۡحَيَوٰةُ ٱلدُّنۡيَا وَيَسۡخَرُونَ مِنَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْۘ وَٱلَّذِينَ ٱتَّقَوۡاْ فَوۡقَهُمۡ يَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِۗ وَٱللَّهُ يَرۡزُقُ مَن يَشَآءُ بِغَيۡرِ حِسَابٖ ٢١٢

212. Waxaa loo qurxiyey kuwa gaaloobay nolosha dhaw ee adduun, waxayna ku jees jeesaan kuwa rumeeyey xaqa, kuwa dhawrsada ayaana ka sarrayn iyaga maalinta qiyaame, Allana wuu arzaaqaa cidduu doono xisaab la'aan.

Waa in dadku wada galo diinta. Kuna dhaqmo dhammaanteed, wadiiqadaha shaydaankana laga leexdo, haddii la gafana Alle waa awoodle, waana kan qiyaamada kala bixin dadka, xaalkuna u noqon. Banii israa'iil waa og yihiin inta xujo u timid, ciddiise diidda nicmada Alle oo baddasha kuna jees jeesta xaqa iyo dadkiisa Alle wuu ciqaabi, wuxuuna sara marin xaq rumeeyaha. **[Al-Baqarah: 208-212].**

كَانَ ٱلنَّاسُ أُمَّةً وَٰحِدَةً فَبَعَثَ ٱللَّهُ ٱلنَّبِيِّـۧنَ مُبَشِّرِينَ وَمُنذِرِينَ وَأَنزَلَ مَعَهُمُ ٱلۡكِتَٰبَ بِٱلۡحَقِّ لِيَحۡكُمَ بَيۡنَ ٱلنَّاسِ فِيمَا ٱخۡتَلَفُواْ فِيهِۚ وَمَا ٱخۡتَلَفَ فِيهِ إِلَّا ٱلَّذِينَ أُوتُوهُ مِنۢ بَعۡدِ مَا جَآءَتۡهُمُ ٱلۡبَيِّنَٰتُ بَغۡيَۢا بَيۡنَهُمۡۖ فَهَدَى ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لِمَا ٱخۡتَلَفُواْ فِيهِ مِنَ ٱلۡحَقِّ بِإِذۡنِهِۦۗ وَٱللَّهُ يَهۡدِي مَن يَشَآءُ إِلَىٰ صِرَٰطٖ مُّسۡتَقِيمٍ ٢١٣

213. Dadku wuxuu ahaa ummad kaliya, wuxuuna Alle u bixiyey Nabiyo u bishaareeya una diga, wuxuuna la soo dajiyey kitaab xaq ah, si ay ugu xukumaan dadka dhexdiisa waxay isku khilaafaan, iskumana khilaafin dhexdiisa kuwii la siiyey mooyee intay u yimaadaan xujooyin, xasad dhexdooda ah dartiis, wuxuuna ku hanuuniyey Alle kuwii rumeeyey waxay isku khilaafeen oo xaq ah, idankiisa, Allana waa ku hanuuniyaa cidduu doono jidkiisa toosan.

أَمْ حَسِبْتُمْ أَن تَدْخُلُوا۟ ٱلْجَنَّةَ وَلَمَّا
يَأْتِكُم مَّثَلُ ٱلَّذِينَ خَلَوْا۟ مِن قَبْلِكُم ۖ
مَّسَّتْهُمُ ٱلْبَأْسَآءُ وَٱلضَّرَّآءُ وَزُلْزِلُوا۟ حَتَّىٰ
يَقُولَ ٱلرَّسُولُ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ مَعَهُۥ مَتَىٰ
نَصْرُ ٱللَّهِ ۗ أَلَآ إِنَّ نَصْرَ ٱللَّهِ قَرِيبٌ ﴿٢١٤﴾

214. Ma waxaad u maleyseen inaad galaysaan jannada isagoon idiin imaannin wixii u yimid kuwii tegay ee hore oo kale, waxaa taabtay baahi iyo cudur, waana la gilgilay intuu ka dhaho rasuulku iyo kuwa rumeeyey lana jira, waa goorma gargaarka Alle, gargaarka Allana waa dhaw yahay.

Dadku xaquu ku kulansanaa intay iska khilaafaan xasad dartiis, wuxuuse Alle hanuuniyey kuwa xaqa rumeeyey, jannada ciyaar laguma helo iyo imtixaan la'aan. Waxaa sugnaatay in Nabigu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): Alle Ayaan ku dhaartee wuu taam yeeli Ilaahay diintan inta ruuxu ka tago Sanca oo aado Xadramuut, isagoon ka yaabayn Alle mooyee iyo waraabaha adhigiisa, waxaase tihiin qoom deg dagi. Waxaa weriyay Bukhaari. **[Al-Baqarah: 213-214].**

يَسْـَٔلُونَكَ مَاذَا يُنفِقُونَ ۖ قُلْ مَآ أَنفَقْتُم
مِّنْ خَيْرٍ فَلِلْوَٰلِدَيْنِ وَٱلْأَقْرَبِينَ وَٱلْيَتَٰمَىٰ
وَٱلْمَسَٰكِينِ وَٱبْنِ ٱلسَّبِيلِ ۗ وَمَا تَفْعَلُوا۟
مِنْ خَيْرٍ فَإِنَّ ٱللَّهَ بِهِۦ عَلِيمٌ ﴿٢١٥﴾

215. Waxay ku warsan maxay bixiyaan, waxaad dhahdaa waxaad bixisaan oo khayr ah waxaa mudan labada waalid, qaraabada, agoonta, masaakiinta iyo socdaha waxaad fashaanna oo khayr ah Alle waa og yahay.

كُتِبَ عَلَيْكُمُ ٱلْقِتَالُ وَهُوَ كُرْهٌ
لَّكُمْ ۖ وَعَسَىٰٓ أَن تَكْرَهُوا۟ شَيْـًٔا وَهُوَ
خَيْرٌ لَّكُمْ ۖ وَعَسَىٰٓ أَن تُحِبُّوا۟ شَيْـًٔا
وَهُوَ شَرٌّ لَّكُمْ ۚ وَٱللَّهُ يَعْلَمُ وَأَنتُمْ لَا
تَعْلَمُونَ ﴿٢١٦﴾

216. Waxaa laydinku waajibiyey dagaal idinkoo neceb, waxaa laga yaabaa inaad nacdaan wax, isagoo khayr idiin ah, waxaana laga yaabaa inaad jeclaataan wax isagoo shar idiin ah, Alle ayaa wax og idinkuse ma ogidin.

Waa in wax la sadaqaysto waxna la baxsadaa dadkana loo naxariisto gaarahaan labada waalid, qaraabada, agoonta, masaakiinta iyo dadka musaafurka ah,

diinta islaamkuna waa diin naxariis iyo xidhiidhin, waana inay saas gartaan muslimiintu kuna dhaqmaan, tan kale waxaa lagu waajib yeelay muslimiinta inay jidka Alle ku dagaallamaan, maxaa yeeley waxaa loo baahan yahay caddaalad, nabadgalyo, sinnaan iyo barwaaqo ku wada noolaansho intaasna waxaa laga helaa diinta islaamka sida ka muuqatay socodka taariikhda, saas darteed ciddii ka hortimaada socodkaas waa in laga leexiyo, tanse la dhaho jahaadku ma isdaafacbaa mise waa weerar waa ruuxaan garannin macnaha jahaad. Jahaadkuna waa ka guda wayn yahay dagaal. Oo waxaaba jira jahaad aan dagaal ahayn, waana arrin cadawga islaamku keeneen, muslimiintuna qaarkeed si niyad sami ah ugu kala jabeen iyagoo fili inay diinta daafici jahaadkuse waa ka waasacsan yahay difaac iyo weerar, halkanna kuma faahfaahin karro. **[Al-Baqarah: 215-216].**

يَسْـَٔلُونَكَ عَنِ ٱلشَّهْرِ ٱلْحَرَامِ قِتَالٍ فِيهِ ۖ قُلْ قِتَالٌ فِيهِ كَبِيرٌ ۖ وَصَدٌّ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ وَكُفْرٌۢ بِهِۦ وَٱلْمَسْجِدِ ٱلْحَرَامِ وَإِخْرَاجُ أَهْلِهِۦ مِنْهُ أَكْبَرُ عِندَ ٱللَّهِ ۚ وَٱلْفِتْنَةُ أَكْبَرُ مِنَ ٱلْقَتْلِ ۗ وَلَا يَزَالُونَ يُقَـٰتِلُونَكُمْ حَتَّىٰ يَرُدُّوكُمْ عَن دِينِكُمْ إِنِ ٱسْتَطَـٰعُوا۟ ۚ وَمَن يَرْتَدِدْ مِنكُمْ عَن دِينِهِۦ فَيَمُتْ وَهُوَ كَافِرٌ فَأُو۟لَـٰٓئِكَ حَبِطَتْ أَعْمَـٰلُهُمْ فِى ٱلدُّنْيَا وَٱلْـَٔاخِرَةِ ۖ وَأُو۟لَـٰٓئِكَ أَصْحَـٰبُ ٱلنَّارِ ۖ هُمْ فِيهَا خَـٰلِدُونَ ﴿٢١٧﴾

217. Waxay ku warsan dagaalka bisha xurmaysan (rajab iyo wax la mid ah) waxaad dhahdaa dagaalku dhexdiisa waa wayn yahay, ka celinta jidka Alle iyo ka gaalowgiisa iyo (in muslimiinta loo diido) Masaajidka xurmeysan iyo ka bixinta ehelkiisa yaase kaga wayn Alle agtiisa, gaalaynta dadka yaana ka wayn dilka, kama tagaan gaaladu inay idinla dagaallmaan intay idinka celiyaan diintiinna hadday karaan, ruuxii ka ridooba diintiisa oo dhinta isagoo gaal ah kuwaasi waa kuwa uu buray camalkoodu adduun iyo aakhiraba kuwaasina waa naarta ehelkeeda, wayna ku waari dhexdeeda.

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَٱلَّذِينَ هَاجَرُوا۟ وَجَـٰهَدُوا۟ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ أُو۟لَـٰٓئِكَ يَرْجُونَ رَحْمَتَ ٱللَّهِ ۚ وَٱللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٢١٨﴾

218. Kuwa rumeeyey xaqa iyo kuwii hijrooday ee ku jahaaday jidka Alle kuwaasi waxay rajayn naxariista Alle, Alle na waa dambidhaafe naxariista.

Diinta islaamku ma aha diin dagaal iyo dhiig daadis xaq darra ah, hase yeeshee ma aha diin dulli iyo xadgudub iyo gardarro qaadan iyo in lagu soo duulo xeradeeda, illeen waa dullowday ummad loogu soo duulay gurigeedee, tan kale gaalnimada yaa ka weyn bilaha xurmada leh oo la dagaallamo (si kama' ah), gaalana ma dayso muslim intay ka gaalayso hadday karaan, waana cid khasaartay oo ehelu naar ah cid gaalnimo ku dhimatay (Alle ayaa laga magangalaye) waxaase khayr iyo naxariis rajayn kuwa xaqa rumeeya ee xumaanta ka fogaada jidka Alle na ku jahaada. **[Al-Baqarah: 217-218].**

219. Waxay ku waydiin khamrada iyo qamaarka waxaad dhahdaa waxaa ku sugan dhexdooda dambi weyn, iyo wax nacfi ah dambigooda yaana ka weyn nacfigooda, waxayna ku waydiin maxay bixiyaan, waxaad dhahdaa (bixiya) saa'idka, saasuuna Alle idinku caddayn aayadihiisa waxaadna mudan tihiin inaad fikirtaan.

* يَسْـَٔلُونَكَ عَنِ ٱلْخَمْرِ وَٱلْمَيْسِرِ ۖ
قُلْ فِيهِمَآ إِثْمٌ كَبِيرٌ وَمَنَٰفِعُ لِلنَّاسِ
وَإِثْمُهُمَآ أَكْبَرُ مِن نَّفْعِهِمَا ۗ
وَيَسْـَٔلُونَكَ مَاذَا يُنفِقُونَ ۖ قُلِ ٱلْعَفْوَ ۗ
كَذَٰلِكَ يُبَيِّنُ ٱللَّهُ لَكُمُ ٱلْـَٔايَٰتِ
لَعَلَّكُمْ تَتَفَكَّرُونَ ﴿٢١٩﴾

220. Adduun iyo aakhiraba (inaad ka fikirtaan) waxayna ku waydiin agoonta, waxaad dhahdaa wanaajintooda yaa khayr badan, haddaad dheehdaanna waa walaalihiin, Alle na waa og yahay cidda wax fasaadin iyo kan hagaajin, haduu doono Alle na wuu idin dhibi lahaa, Alle na waa adkaade falsan.

فِى ٱلدُّنْيَا وَٱلْـَٔاخِرَةِ ۗ وَيَسْـَٔلُونَكَ عَنِ
ٱلْيَتَٰمَىٰ ۖ قُلْ إِصْلَاحٌ لَّهُمْ خَيْرٌ ۖ وَإِن
تُخَالِطُوهُمْ فَإِخْوَٰنُكُمْ ۚ وَٱللَّهُ يَعْلَمُ
ٱلْمُفْسِدَ مِنَ ٱلْمُصْلِحِ ۚ وَلَوْ شَآءَ ٱللَّهُ
لَأَعْنَتَكُمْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٢٢٠﴾

Khamradu waa wax xun siduu garan ruuxii caqli leh, maxaa yeelay waxay ka qaaddaa ruuxa garaadka oo dadku kaga duwan yahay xoolaha, diinta islaamkuna waa reebtay cabbiddeeda inkastoo tartiib tartiib loo xaraam yeeley, sidoo kale waxaa xaaraan ah qamaarka oo ah cunid xaq darro ee xoolo dad kale taasina kuma bannaana diinta islaamka waana in la fikiraa oo wax la gartaa, lana sadaqaysto gaar ahaan dheeraadka, laguna dadaalo dhaqaalaynta agoonta haddaad dheehdaanna dhib kuma jiro, isagoo Alle kala og yahay kan wax hagaajin iyo kan fasaadin. **[Al-Baqarah: 219-220].**

وَلَا تَنكِحُواْ ٱلۡمُشۡرِكَٰتِ حَتَّىٰ يُؤۡمِنَّۚ وَلَأَمَةٞ مُّؤۡمِنَةٌ خَيۡرٞ مِّن مُّشۡرِكَةٖ وَلَوۡ أَعۡجَبَتۡكُمۡۗ وَلَا تُنكِحُواْ ٱلۡمُشۡرِكِينَ حَتَّىٰ يُؤۡمِنُواْۚ وَلَعَبۡدٞ مُّؤۡمِنٌ خَيۡرٞ مِّن مُّشۡرِكٖ وَلَوۡ أَعۡجَبَكُمۡۗ أُوْلَٰٓئِكَ يَدۡعُونَ إِلَى ٱلنَّارِۖ وَٱللَّهُ يَدۡعُوٓاْ إِلَى ٱلۡجَنَّةِ وَٱلۡمَغۡفِرَةِ بِإِذۡنِهِۦۖ وَيُبَيِّنُ ءَايَٰتِهِۦ لِلنَّاسِ لَعَلَّهُمۡ يَتَذَكَّرُونَ ٢٢١

221. Ha guurasannina haweenka mushrikaadka ah, intay ka rumeeyaan, addoon rumaysan xaqa yaa ka khayr roon mid mushrikad ah (Alle la wadaajisay cibaado) haba idin yaab galiso, hana u guurinnina ragga mushrikiinta ah intay ka rumeyn, addoon rumeeyey xaqa yaa ka khayr badan mid mushrik ah haba idin yaab galiyee, kuwaasu waxay idiin ku yeedhi naarta, Alle na wuxuu idiin ku yeedhi janno iyo dambidhaaf idinkiisa, wuxuuna u caddayn aayaadkiisa dadka si ay u xusuustaan.

وَيَسۡـَٔلُونَكَ عَنِ ٱلۡمَحِيضِۖ قُلۡ هُوَ أَذٗى فَٱعۡتَزِلُواْ ٱلنِّسَآءَ فِي ٱلۡمَحِيضِ وَلَا تَقۡرَبُوهُنَّ حَتَّىٰ يَطۡهُرۡنَۖ فَإِذَا تَطَهَّرۡنَ فَأۡتُوهُنَّ مِنۡ حَيۡثُ أَمَرَكُمُ ٱللَّهُۚ إِنَّ ٱللَّهَ يُحِبُّ ٱلتَّوَّٰبِينَ وَيُحِبُّ ٱلۡمُتَطَهِّرِينَ ٢٢٢

222. Waxay ku waydiin caadada (haweenka) dheh waa dhib (wasakh) ee ka fogaada meesha caadada, hana u dhawaannina intay ka daahir noqon, markay daahir noqdaan uga taga meeshuu idin faray Alle, ilaahayna wuxuu jecel yahay kuwa toobadda badan, wuxuuna jecel yahay kuwa is daahiriya.

نِسَآؤُكُمۡ حَرۡثٞ لَّكُمۡ فَأۡتُواْ حَرۡثَكُمۡ أَنَّىٰ شِئۡتُمۡۖ وَقَدِّمُواْ لِأَنفُسِكُمۡۚ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ وَٱعۡلَمُوٓاْ أَنَّكُم مُّلَٰقُوهُۗ وَبَشِّرِ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ ٢٢٣

223. Haweenkiinnu beer bay idiin yihiin ee ugu taga beertiinna saad doontaan "oo bannaan", una hormarsada naftiinna "wanaag" Alle na ka dhawrsada, ogaadana inaad la kulmaysaan Alle, una bishaaree mu'miniinta.

Gaaladaan kitaab lahayn waxaa xaaraan ah in lays guursado, gaaloo dhanna waa ka reebban tahay haweenay muslim ah, haweenkana waa inaan loo tagin waqtiga caadada, illeen waa xaaraane, waxaase xalaal ah meesha Alle xalaaleeyey markay daahir noqdaan, haweenkuna waa beer oo kale. Waana in looga tago meesha Alle banneeyey. Wanaag iyo khayrna la hormarsado lana ogaado in Alle lala kulmi, lagana dhawrsado, loona bishaareeyo mu'miniinta. **[Al-Baqarah: 221-223].**

وَلَا تَجْعَلُوا۟ ٱللَّهَ عُرْضَةً لِّأَيْمَٰنِكُمْ أَن تَبَرُّوا۟ وَتَتَّقُوا۟ وَتُصْلِحُوا۟ بَيْنَ ٱلنَّاسِ ۚ وَٱللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٢٢٤﴾

224. Ha uga yeelina Alle kabdhood dhaartiinna inaadan samo falayn oo dhawrsanayn, oo hagaajineyn dadka dhexdiisa, Allena waa maqle wax og.

لَّا يُؤَاخِذُكُمُ ٱللَّهُ بِٱللَّغْوِ فِىٓ أَيْمَٰنِكُمْ وَلَٰكِن يُؤَاخِذُكُم بِمَا كَسَبَتْ قُلُوبُكُمْ ۗ وَٱللَّهُ غَفُورٌ حَلِيمٌ ﴿٢٢٥﴾

225. Idiin ma qabanayo Alle dhaar qasad la'aaneed, wuxuuse idiin qaban waxay kasbatay quluubtiinnu, Alle na waa dambi dhaafe dul badan.

لِّلَّذِينَ يُؤْلُونَ مِن نِّسَآئِهِمْ تَرَبُّصُ أَرْبَعَةِ أَشْهُرٍ ۖ فَإِن فَآءُو فَإِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٢٢٦﴾

226. Kuwa ka dhaarta haweenkooda (tan iyo muddo) waxaa la sugi afar bilood, hadday ka noqdaanna Alle waa dambi dhaafe naxariista.

وَإِنْ عَزَمُوا۟ ٱلطَّلَٰقَ فَإِنَّ ٱللَّهَ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٢٢٧﴾

227. Hadday goostaan furidna Alle waa maqle oge ah.

وَٱلْمُطَلَّقَٰتُ يَتَرَبَّصْنَ بِأَنفُسِهِنَّ ثَلَٰثَةَ قُرُوٓءٍ ۚ وَلَا يَحِلُّ لَهُنَّ أَن يَكْتُمْنَ مَا خَلَقَ ٱللَّهُ فِىٓ أَرْحَامِهِنَّ إِن كُنَّ يُؤْمِنَّ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ ۚ وَبُعُولَتُهُنَّ أَحَقُّ بِرَدِّهِنَّ فِى ذَٰلِكَ إِنْ أَرَادُوٓا۟ إِصْلَٰحًا ۚ وَلَهُنَّ مِثْلُ ٱلَّذِى عَلَيْهِنَّ بِٱلْمَعْرُوفِ ۚ وَلِلرِّجَالِ عَلَيْهِنَّ دَرَجَةٌ ۗ وَٱللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٢٢٨﴾

228. Haweenka la furayna waxay la sugi naftooda saddex daahir, mana u bannaana inay qariyaan waxa Alle ku abuuray ilmo galeenkooda hadday yihiin kuwo rumeeyey Alle iyo maalinta dambe. Raggoodaana ku xaq badan soo celintooda arrintaas (cidadaas dhexdeeda) hadday doonaan wanaag, haweenkuna waxay leeyihiin wax la mid ah

waxa korkooda ah si fiican, raggase waxaa ugu sugan korkooda darajo (dheeraad), Allana waa adkaade falsan.

Ma habboona in Alle si fudud loogu dhaarto had iyo jeer iyo inaan wanaag la falin, dhaartiise carrabku xado Alle uma qabto, waxaase laysu qaban tan la niyoodo, kuwa ku dhaarta inay taabanayn haweenkooda waxaa la sugi afar bilood: hadday oofiyaan waa wanaag, haddii kale waa inuu furo, haweenka la furana waxay tirsan saddex daahirnimo iyagoon qarinayn waxa uurkooda ku jira wayna isku xaq leeyihiin labada dhinac inkastoo tan raggu badan tahay. **[Al-Baqarah: 224-228].**

229. Furiddu waa labo jeer, intaas ka dib ama waa haysasho fiican, ama sii dayn fiican, mana bannaana inaad ka qaadataan waxaad siiseen wax, inay ka cabsadaan inayan oogin xuduudda Alle mooyee, haddaad ka cabsataan inayan oogin xuduudda Alle wax dhib ah ma saarna korkooda waxay isku furato, taasi waa xuduudda Alle ee ha tallaabina ruuxii tallaaba xuduudda Alle kuwaasi waa daalimiinta.

ٱلطَّلَٰقُ مَرَّتَانِ ۖ فَإِمۡسَاكُۢ بِمَعۡرُوفٍ أَوۡ تَسۡرِيحُۢ بِإِحۡسَٰنٖ ۗ وَلَا يَحِلُّ لَكُمۡ أَن تَأۡخُذُواْ مِمَّآ ءَاتَيۡتُمُوهُنَّ شَيۡـٔٗا إِلَّآ أَن يَخَافَآ أَلَّا يُقِيمَا حُدُودَ ٱللَّهِۖ فَإِنۡ خِفۡتُمۡ أَلَّا يُقِيمَا حُدُودَ ٱللَّهِ فَلَا جُنَاحَ عَلَيۡهِمَا فِيمَا ٱفۡتَدَتۡ بِهِۦۗ تِلۡكَ حُدُودُ ٱللَّهِ فَلَا تَعۡتَدُوهَاۚ وَمَن يَتَعَدَّ حُدُودَ ٱللَّهِ فَأُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلظَّٰلِمُونَ ٢٢٩

230. Hadduu furo (dalqaddii saddexaad) uma bannaana kadib intay ka guursato nin kale mooyee, hadduu (kaasi) furana dhib ma saarra hadday is ceshadaan (is guursadaan) hadday u malayn inay oogi xuduudda Alle, taasi waa xuduudda Alle wuxuuna u caddayn ciddii wax og.

فَإِن طَلَّقَهَا فَلَا تَحِلُّ لَهُۥ مِنۢ بَعۡدُ حَتَّىٰ تَنكِحَ زَوۡجًا غَيۡرَهُۥۗ فَإِن طَلَّقَهَا فَلَا جُنَاحَ عَلَيۡهِمَآ أَن يَتَرَاجَعَآ إِن ظَنَّآ أَن يُقِيمَا حُدُودَ ٱللَّهِۗ وَتِلۡكَ حُدُودُ ٱللَّهِ يُبَيِّنُهَا لِقَوۡمٖ يَعۡلَمُونَ ٢٣٠

Guurka waxaa looga dan leeyahay in lagu dhiso guri fiican oo uu ka abuurmo qoys wanaagsan, islaamkuna ma jecla in la dumiyo gurigaas, saas darteed yuu furitaanku u noqday wax Alle u cadhoodo, ha yeeshee hadduu noqdo lagama maarmaan waa in si quruxsan laysu furaa. Xoolo xaq darrana la kala cunin, waxaana sunno ah inuusan israacinin dalaaqaha, waxaa laga yaabaa in wax dib ka soo cusboonaadee, inay haweenaydu xoolo ku gadato dalaaqdana waa bannaan tahay, mar hadday dalaaqdoo dhan ku kala tagaanna ma bannaana inay isa soo ceshadaan haddaan nin kale guursan oosan furin, kaasoon maxlal ahayn. Anas binu Maalig waxaa laga wariyey inuu yidhi: nin baa u yimid Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuuna yidhi: Rasuulka Allow wuxuu sheegay Alle furidda laba jeer ee aaway tii seddexaad wuxuuna yidhi: haysasho fiican ama sii dayn fiican. **[Al-Baqarah: 229-230].**

وَإِذَا طَلَّقْتُمُ ٱلنِّسَآءَ فَبَلَغْنَ أَجَلَهُنَّ فَأَمْسِكُوهُنَّ بِمَعْرُوفٍ أَوْ سَرِّحُوهُنَّ بِمَعْرُوفٍ ۚ وَلَا تُمْسِكُوهُنَّ ضِرَارًا لِّتَعْتَدُوا۟ ۚ وَمَن يَفْعَلْ ذَٰلِكَ فَقَدْ ظَلَمَ نَفْسَهُۥ ۚ وَلَا تَتَّخِذُوٓا۟ ءَايَٰتِ ٱللَّهِ هُزُوًا ۚ وَٱذْكُرُوا۟ نِعْمَتَ ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ وَمَآ أَنزَلَ عَلَيْكُم مِّنَ ٱلْكِتَٰبِ وَٱلْحِكْمَةِ يَعِظُكُم بِهِۦ ۚ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَٱعْلَمُوٓا۟ أَنَّ ٱللَّهَ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمٌ ﴿٢٣١﴾

231. Haddaad furtaan haweenka oy gaadhaan muddadooda u haysta si fiican ama u sii daaya si fiican, hana u haysannina inaad dhibtaan si aad u xad gudubtaan, ruuxii fala sidaas wuxuu dulmiyey naftiisa, ee ha ka yeelina aayaadka Alle jees jees, xusuustana nicmada Alle ee korkiinna, iyo wuxuu ku dejiyey korkiinna oo kitaab iyo xigmad ah (sunnada) wuu idinku wacdoon Alle quraanka, ee ka dhawrsada Alle, ogaadana in Alle wax kasta og yahay.

وَإِذَا طَلَّقْتُمُ ٱلنِّسَآءَ فَبَلَغْنَ أَجَلَهُنَّ فَلَا تَعْضُلُوهُنَّ أَن يَنكِحْنَ أَزْوَٰجَهُنَّ إِذَا تَرَٰضَوْا۟ بَيْنَهُم بِٱلْمَعْرُوفِ ۗ ذَٰلِكَ يُوعَظُ بِهِۦ مَن كَانَ مِنكُمْ يُؤْمِنُ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ ۗ ذَٰلِكُمْ أَزْكَىٰ لَكُمْ وَأَطْهَرُ ۚ وَٱللَّهُ يَعْلَمُ وَأَنتُمْ لَا تَعْلَمُونَ ﴿٢٣٢﴾

232. Haddaad furtaan haweenka oo ay gaadhaan muddadooda ha u diidina inay guursadaan nimankooda hadday raalli isu noqdaan si fiican, arrintaasu waa mid la idinku waanin ciddii idinka mid ah oo rumayn Alle iyo maalinta dambe, saasaana idiin waanaagsan oo idiin nadiifsan, Allana waa og yahay idinkuna ma ogidin.

Xaq ma aha mana habboona in haweenka la dhibo, waa in si fiican laysu qabaa ama si fiican loo kala tago, mase bannaana in loo xajisto si loo dhibo, saasina waa tacaddi iyo gardarro iyo ku ciyaarid aayadaha Alle, waana inaan la halmaamin nicmada Alle oo ah quraanka iyo sunnada Nabiga, waana in xumaanta laga dhawrsado, mar hadday laba ruux is furaanna ma habboona in la cidhiidhyo haweeneyda loona diido inay guursato ninkay isku raalli noqdaan, waxaana arrintaas loo sheegi ciddii xaqa rumeysay, Alle iyo qiyaamada. **[Al-Baqarah: 231-232].**

233. Waalidaadka (hooyooyinku) waxay nuujin carruurtooda labo sano oo dhammaystiran ciddii doonta inay taam yeesho nuugidda, kan wax loo dhalayna waxaa saaran cunnadooda iyo arrad boxooda si fiican, lagumo dhibo naf waxayna awoodin laguma dhibo hooyo ilmaheeda dartiis (lamana dhibo) aabbo ilmihiisa dartiis, kan wax dhaxlaya waxaa saaran taasoo kale, hadday doonaan gudhin iyagoo raalli isaga ah kana wadatashaday dhib ma saarra korkooda, haddaad doontaan inaad u nuujin dalabtaan carruurtiinna (haweenay kale) dhib korkiinna ma saarra haddad u dhiibtaan waxaad bixinaysaan si fiican, ka dhawrsada Alle, ogaadana in waxaad camal falaysaan Alle arko.

* وَٱلْوَٰلِدَٰتُ يُرْضِعْنَ أَوْلَٰدَهُنَّ حَوْلَيْنِ
كَامِلَيْنِ ۖ لِمَنْ أَرَادَ أَن يُتِمَّ ٱلرَّضَاعَةَ ۚ
وَعَلَى ٱلْمَوْلُودِ لَهُۥ رِزْقُهُنَّ وَكِسْوَتُهُنَّ
بِٱلْمَعْرُوفِ ۚ لَا تُكَلَّفُ نَفْسٌ إِلَّا
وُسْعَهَا ۚ لَا تُضَآرَّ وَٰلِدَةٌۢ بِوَلَدِهَا وَلَا
مَوْلُودٌ لَّهُۥ بِوَلَدِهِۦ ۚ وَعَلَى ٱلْوَارِثِ مِثْلُ
ذَٰلِكَ ۗ فَإِنْ أَرَادَا فِصَالًا عَن تَرَاضٍ
مِّنْهُمَا وَتَشَاوُرٍ فَلَا جُنَاحَ عَلَيْهِمَا ۗ وَإِنْ
أَرَدتُّمْ أَن تَسْتَرْضِعُوٓا۟ أَوْلَٰدَكُمْ فَلَا
جُنَاحَ عَلَيْكُمْ إِذَا سَلَّمْتُم مَّآ ءَاتَيْتُم
بِٱلْمَعْرُوفِ ۗ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَٱعْلَمُوٓا۟ أَنَّ ٱللَّهَ
بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿٢٣٣﴾

Nuujinta ilmaha waa arrin muhiim ah oo loo baahan yahay inay hooyadu fasho hadduusan jirin wax garowsha ah, aabahana waxaa saaran masruufka iyo arrad baxa hooyada, iyadoo Alle cidna ku mashaqaynin wuxuusan karin, mar kastooy isku oggolaadaan in la gudhiyana waxba kuma jabna haddaan hooyo, aabe iyo ilmaha midna lagu dhibayn, hadday cid kale nuujiso dhib ma leh haddii si fiican xuquuqda laysu siiyo, iyadoo Alle laga dhawrsan, lana og yahay

in Alle arko waxa la fali. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: wax ma xaaraan yeesho nuugiddaan labo sano dhexdeed ahayn. **[Al-Baqarah: 233].**

وَٱلَّذِينَ يُتَوَفَّوْنَ مِنكُمْ وَيَذَرُونَ أَزْوَٰجًا يَتَرَبَّصْنَ بِأَنفُسِهِنَّ أَرْبَعَةَ أَشْهُرٍ وَعَشْرًا ۖ فَإِذَا بَلَغْنَ أَجَلَهُنَّ فَلَا جُنَاحَ عَلَيْكُمْ فِيمَا فَعَلْنَ فِىٓ أَنفُسِهِنَّ بِٱلْمَعْرُوفِ ۗ وَٱللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرٌ ﴿٢٣٤﴾

234. Kuwa la oofsado (dhinta) oo idinka mid ah oo ka taga haween waxay la sugi (ciddo) naftooda afar bilood iyo toban bari, markay gaadhaan muddadoodana wax dhib ah idinkama saarra waxay ku falaan naftooda si fiican, Alle na waxaad falaysaan waa og yahay.

وَلَا جُنَاحَ عَلَيْكُمْ فِيمَا عَرَّضْتُم بِهِۦ مِنْ خِطْبَةِ ٱلنِّسَآءِ أَوْ أَكْنَنتُمْ فِىٓ أَنفُسِكُمْ ۚ عَلِمَ ٱللَّهُ أَنَّكُمْ سَتَذْكُرُونَهُنَّ وَلَٰكِن لَّا تُوَاعِدُوهُنَّ سِرًّا إِلَّآ أَن تَقُولُوا۟ قَوْلًا مَّعْرُوفًا ۚ وَلَا تَعْزِمُوا۟ عُقْدَةَ ٱلنِّكَاحِ حَتَّىٰ يَبْلُغَ ٱلْكِتَٰبُ أَجَلَهُۥ ۚ وَٱعْلَمُوٓا۟ أَنَّ ٱللَّهَ يَعْلَمُ مَا فِىٓ أَنفُسِكُمْ فَٱحْذَرُوهُ ۚ وَٱعْلَمُوٓا۟ أَنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ حَلِيمٌ ﴿٢٣٥﴾

235. Dhib (dambi) korkiinna ma aha waxaad sarbeebtaan oo hadal haween ah (doonid) ama aad ku qarisaan naftiinna, Alle waa og yahay inaad sheegaysaan haweenkaas, laakiin hawgu yaboohina qarsoodi inaad dhahaysaan hadal fiican mooyee, ha goynina (ha u qasdina) xidhidda guurka intuu ka gaadho kitaabku "ciddadu" waqtigooda, ogaadana in Alle og yahay waxa naftiinna ku sugan ee ka digtoonaada, ogaadana in Alle dambi dhaafe dulsan yahay.

لَّا جُنَاحَ عَلَيْكُمْ إِن طَلَّقْتُمُ ٱلنِّسَآءَ مَا لَمْ تَمَسُّوهُنَّ أَوْ تَفْرِضُوا۟ لَهُنَّ فَرِيضَةً ۚ وَمَتِّعُوهُنَّ عَلَى ٱلْمُوسِعِ قَدَرُهُۥ وَعَلَى ٱلْمُقْتِرِ قَدَرُهُۥ مَتَٰعًۢا بِٱلْمَعْرُوفِ ۖ حَقًّا عَلَى ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿٢٣٦﴾

236. Dhib ma saarro korkiinna haddaad haweenka furtaan idinkoon taaban ama u qaddarin meher, ha ugu deeqo (haweenka) kii hodona qaddarkiisa kan cidhiidhyanna qaddarkiisa, waa raaxayn wanaag ah oo xaq ku ah kuwa ixsaanka sameeya.

Waxaa Alle jideeyey in haweenka laga dhinto sugaan muddo ah afar bilood iyo toban bari, markay muddadaas dhammeystaanna waxba korkooda ma aha hadday guursadaan si wanaagsan, muddadaas ay ciddadda ku jirtona ma habboona in guur loo caddeeyo si dul mar ah mooye, mana aha in guurkooda la goosto intay muddadu ka dhammaan, tan kale haddii la furo haweenay aan la taaban meherna loo sheegin wax meher ah ma waajibayo, wuxuuse bixin mutco gacan maris uun hadba awooddiis, waana arrin xaq ah, waxaana sugnaaday: inayna bannaanayn inay haweeney xaqa rumeysan isu basaasiso qof saddex maalmood wax ka badan, ninkeeda oy afar bilood iyo toban bari u tirsan mooyee. **[Al-Baqarah: 234-236].**

وَإِن طَلَّقْتُمُوهُنَّ مِن قَبْلِ أَن تَمَسُّوهُنَّ وَقَدْ فَرَضْتُمْ لَهُنَّ فَرِيضَةً فَنِصْفُ مَا فَرَضْتُمْ إِلَّآ أَن يَعْفُونَ أَوْ يَعْفُوَا۟ ٱلَّذِى بِيَدِهِۦ عُقْدَةُ ٱلنِّكَاحِ ۚ وَأَن تَعْفُوٓا۟ أَقْرَبُ لِلتَّقْوَىٰ ۚ وَلَا تَنسَوُا۟ ٱلْفَضْلَ بَيْنَكُمْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿٢٣٧﴾

237. Haddaad furtaan haweenka taabasho ka hor idinkoo wax (meher ah) u qaddaray waxay mudan kala badhka waxaad qaddarteen, inay cafiyaan mooyee ama uu cafiyo midka gacantiisa xidhidda nikaaxu ku jiro, (waa ninka ama waliga) haddaad iska cafisaan yaa u dhowse dhawrsashada, hana halmaamina fadliga (dheeraadka) dhexdiinna ah, Allana waxaad camal falaysaan wuu arkaa.

حَٰفِظُوا۟ عَلَى ٱلصَّلَوَٰتِ وَٱلصَّلَوٰةِ ٱلْوُسْطَىٰ وَقُومُوا۟ لِلَّهِ قَٰنِتِينَ ﴿٢٣٨﴾

238. Xifdiya (ilaaliya) salaadaha iyo salaadda dhexe (sharafta badan) (casarka) una istaaga dar Alle idinkoo adeeci, (khushuuci).

فَإِنْ خِفْتُمْ فَرِجَالًا أَوْ رُكْبَانًا ۖ فَإِذَآ أَمِنتُمْ فَٱذْكُرُوا۟ ٱللَّهَ كَمَا عَلَّمَكُم مَّا لَمْ تَكُونُوا۟ تَعْلَمُونَ ﴿٢٣٩﴾

239. Haddaad cabsataan tukada idinkoo lug ah ama saaran gaadiid, markaad aamin noqotaan xusa Alle siduu idiin baray waxaydaan aqoonnin, (caadi u tukada).

Haddii la furo haweeney aan la taabannin meherna loo sheegay waxay mudan meherka nuskiis, inay cafido ama ninku cafiyo inta kale ama waligeedu cafiyo mooyee, inaan wanaagga la halmaamin yaana khayrku ku jiraa, illeen Alle waa wax walba arkee, tan kale waa in Alle lagu xidhnaado, salaaddana la ilaaliyo gaar ahaan salaadda casar. Allena si dhab ah loo adeeco, haddii cabsi iyo dagaal jirana waaxaa loo tukan sidii fududaata, marka la aammin noqdana waxaa loo tukan si caadi ah. Waxaa sugnaatay in Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) yidhi: maalintii (godka) waxay naga shuqliyeen salaaddii dhexe (sharafta lahayd) casarka, Alle ha ka buuxiyo quluubtooda iyo guryohooda naar, wuxuuna tukaday maqribka iyo cishaha dhexdooda. Waxaa wariyay Bukhaari iyo Muslim iyo kuwa kale. **[Al-Baqarah: 237-239].**

وَٱلَّذِينَ يُتَوَفَّوْنَ مِنكُمْ وَيَذَرُونَ أَزْوَٰجًا وَصِيَّةً لِّأَزْوَٰجِهِم مَّتَٰعًا إِلَى ٱلْحَوْلِ غَيْرَ إِخْرَاجٍ ۚ فَإِنْ خَرَجْنَ فَلَا جُنَاحَ عَلَيْكُمْ فِى مَا فَعَلْنَ فِىٓ أَنفُسِهِنَّ مِن مَّعْرُوفٍ ۗ وَٱللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٢٤٠﴾

240. Kuwa la oofsado (dhinta) ee idinka mid ah kana taga haween dardaaranka haweenkoodu waa u raaxayn tan iyo sano iyagoon la bixinayn, haddayse baxaan dhib (dambi) ma saarra korkiinna waxay ku falaan naftooda oo wanaag ah, Allana waa adkaade falsan.

وَلِلْمُطَلَّقَٰتِ مَتَٰعٌۢ بِٱلْمَعْرُوفِ ۖ حَقًّا عَلَى ٱلْمُتَّقِينَ ﴿٢٤١﴾

241. Kuwa la furo waxaa u sugnaaday gacan maris (mataac) si fiican, waxayna ku tahay xaq kuwa dhawrsada.

كَذَٰلِكَ يُبَيِّنُ ٱللَّهُ لَكُمْ ءَايَٰتِهِۦ لَعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ ﴿٢٤٢﴾

242. Saasuuna Alle idiinku caddayn aayaadkiisa inaad kastaan darteed.

* أَلَمْ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ خَرَجُوا۟ مِن دِيَٰرِهِمْ وَهُمْ أُلُوفٌ حَذَرَ ٱلْمَوْتِ فَقَالَ لَهُمُ ٱللَّهُ مُوتُوا۟ ثُمَّ أَحْيَٰهُمْ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَذُو فَضْلٍ عَلَى ٱلنَّاسِ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يَشْكُرُونَ ﴿٢٤٣﴾

243. Ka warran (warkoodu ma ku soo gaadhay) kuwii ka baxay guryahooda iyagoo kuman ah digtooni geeri darteed, markaas ku yidhi Alle dhinta, soona nooleeyey, Allana waa saaxibul fadli (dheeraad) dadka korkiisa, dadka badankiisuse kuma mahdiyaan.

وَقَٰتِلُواْ فِي سَبِيلِ ٱللَّهِ وَٱعۡلَمُوٓاْ أَنَّ ٱللَّهَ سَمِيعٌ عَلِيمٞ ٢٤٤

244. Ku dirira jidka Alle, ogaadana in Alle maqli oo og yahay.

مَّن ذَا ٱلَّذِي يُقۡرِضُ ٱللَّهَ قَرۡضًا حَسَنٗا فَيُضَٰعِفَهُۥ لَهُۥٓ أَضۡعَافٗا كَثِيرَةٗۚ وَٱللَّهُ يَقۡبِضُ وَيَبۡصُۜطُ وَإِلَيۡهِ تُرۡجَعُونَ ٢٤٥

245. Waa kuma kan amaah fiican amaahin Alle, oo uu u laban laabo, laban laab badan, Allana wuu ku cidhiidhiyaa rizqiga oo u waasiciyaa (cidduu doono) xaggiisaana loo celiyaa dadka.

Haweenka laga dhinto waa in loo naxariisto, gurigana laga bixinnin, tan iyo sano, intaas ka dibna siday rabaan oo wanaag ah hadday falaan xumaan ma leh, sidoo kale tan la furo waa in la gacan mariyo, illeen way barakaceene. Geeri laga cararana wax ma tarto, Allana wax walba waa awoodaa, ee waa in jidka Alle lagu jahaadaa sadaqo iyo wanaagna la hormarsadaa si Alle laab laab iyo wanaag inoogu abaal mariyo, illeen Allaa wax u quudiya cid walba siduu doonee, waxayna ku tusin isu naxariisashada iyo Alle ku xidhnaanta wanaaggeeda. **[Al-Baqarah: 240-245].**

أَلَمۡ تَرَ إِلَى ٱلۡمَلَإِ مِنۢ بَنِيٓ إِسۡرَٰٓءِيلَ مِنۢ بَعۡدِ مُوسَىٰٓ إِذۡ قَالُواْ لِنَبِيّٖ لَّهُمُ ٱبۡعَثۡ لَنَا مَلِكٗا نُّقَٰتِلۡ فِي سَبِيلِ ٱللَّهِۖ قَالَ هَلۡ عَسَيۡتُمۡ إِن كُتِبَ عَلَيۡكُمُ ٱلۡقِتَالُ أَلَّا تُقَٰتِلُواْۖ قَالُواْ وَمَا لَنَآ أَلَّا نُقَٰتِلَ فِي سَبِيلِ ٱللَّهِ وَقَدۡ أُخۡرِجۡنَا مِن دِيَٰرِنَا وَأَبۡنَآئِنَاۖ فَلَمَّا كُتِبَ عَلَيۡهِمُ ٱلۡقِتَالُ تَوَلَّوۡاْ إِلَّا قَلِيلٗا مِّنۡهُمۡۗ وَٱللَّهُ عَلِيمُۢ بِٱلظَّٰلِمِينَ ٢٤٦

246. Ka warran (warkoodu ma ku soo gaadhay) madaxdii bani israa'iil Muuse ka dib markay ku dheheen Nabigoodii noo soo bixi malig (xaakim) oon ku dagaallanno jidka Alle, wuxuuna yidhi: armaad mudan tihiin haddii laydinku faral yeelo dagaalka inaydaan dagaallamin, waxayna dhaheen maxaannaan ugu dagaallamayn jidka Alle isagoo nalaga bixiyey guryahannagii iyo caruurtannadii (wiilashannadii) markii lagu faral yeelay korkooda dagalkii wey jeedsadeen, in yar oo ka mid ah mooyee, Alle na waa og yahay daalimiinta.

247. Wuxuuna ku yidhi Nabigoodii: Alle wuxuu idiinku bixiyey Dhaaluut malig (xaakim), waxayna dheheen sidee ugu ahaan xukun korkannaga annagoo ka mudan xukunka, aan lana siinnin xoolo waasac ah (badan), wuxuuna yidhi (Nabigii): Alle wuu u doortay korkiinna wuxuuna u siyaadiyey waasacnimo cilmi iyo jidh (xoog), Alle na wuxuu siiyaa xukunkiisa cidduu doono, Alle na waa deeqbadane og.

وَقَالَ لَهُمْ نَبِيُّهُمْ إِنَّ ٱللَّهَ قَدْ بَعَثَ لَكُمْ طَالُوتَ مَلِكًا ۚ قَالُوٓا۟ أَنَّىٰ يَكُونُ لَهُ ٱلْمُلْكُ عَلَيْنَا وَنَحْنُ أَحَقُّ بِٱلْمُلْكِ مِنْهُ وَلَمْ يُؤْتَ سَعَةً مِّنَ ٱلْمَالِ ۚ قَالَ إِنَّ ٱللَّهَ ٱصْطَفَىٰهُ عَلَيْكُمْ وَزَادَهُۥ بَسْطَةً فِى ٱلْعِلْمِ وَٱلْجِسْمِ ۖ وَٱللَّهُ يُؤْتِى مُلْكَهُۥ مَن يَشَآءُ ۚ وَٱللَّهُ وَٰسِعٌ عَلِيمٌ ﴿٢٤٧﴾

Waxay caddayn aayadda hore lagama maarmaannimada in si isku duuban loo dagaallamo iyo hoggaan toosan oo isku mid ah, waana waajib marka lagu dulmiyo oo guryahaaga iyo carruurtaada lagaa eryo, mana bannaana cabsidu markaasoo kale, tan kale ciddii toosan oo cilmina leh caafimaadna qabta yaa mudan inay wax hoggaamiso ee shardi ma aha inuu xoolo badan yahay siday maleeyeen dadka qaarkiis, xaalkuse waa akhlaaq iyo Alle u dhawaansho. **[Al-Baqarah: 246-247].**

248. Nabigoodii wuxuu ku yidhi calaamadda xukunkiisu waa inay idiin timaado taabuud (sanduuq) oy ku jirto xasilloonida Allihiin iyo wax ka soo hadhay waxay ka tageen ehelkii Muuse iyo ehelkii Haaruun oo mala'igtu xambaari, arrintaasna calaamaa idiinku sugan haddaad tihiin mu'miniin.

وَقَالَ لَهُمْ نَبِيُّهُمْ إِنَّ ءَايَةَ مُلْكِهِۦٓ أَن يَأْتِيَكُمُ ٱلتَّابُوتُ فِيهِ سَكِينَةٌ مِّن رَّبِّكُمْ وَبَقِيَّةٌ مِّمَّا تَرَكَ ءَالُ مُوسَىٰ وَءَالُ هَٰرُونَ تَحْمِلُهُ ٱلْمَلَٰٓئِكَةُ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَةً لَّكُمْ إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ﴿٢٤٨﴾

249. Markuu la baxay dhaaluut askartii wuxuu yidhi: Alle wuxuu idinku imtixaami wabi ee ciddii ka cabta iga

فَلَمَّا فَصَلَ طَالُوتُ بِٱلْجُنُودِ قَالَ إِنَّ ٱللَّهَ مُبْتَلِيكُم بِنَهَرٍ فَمَن شَرِبَ مِنْهُ فَلَيْسَ مِنِّى وَمَن لَّمْ يَطْعَمْهُ فَإِنَّهُۥ مِنِّىٓ

إِلَّا مَنِ ٱغۡتَرَفَ غُرۡفَةَۢ بِيَدِهِۦۚ فَشَرِبُواْ مِنۡهُ إِلَّا قَلِيلٗا مِّنۡهُمۡۗ فَلَمَّا جَاوَزَهُۥ هُوَ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ مَعَهُۥ قَالُواْ لَا طَاقَةَ لَنَا ٱلۡيَوۡمَ بِجَالُوتَ وَجُنُودِهِۦۚ قَالَ ٱلَّذِينَ يَظُنُّونَ أَنَّهُم مُّلَٰقُواْ ٱللَّهِ كَم مِّن فِئَةٖ قَلِيلَةٍ غَلَبَتۡ فِئَةَۢ كَثِيرَةَۢ بِإِذۡنِ ٱللَّهِۗ وَٱللَّهُ مَعَ ٱلصَّٰبِرِينَ ٢٤٩

mid ma aha, ruuxaan wax ka dhadhaminna waa iga mid ruux ku qaata gacanta qaadasho mooyee, waxayna ka cabbeen xaggiisa wax yar mooyee, markuu tallaabay isaga iyo colkii la jirkiisa rumeeyay, waxay dhaheen awood uma lihin maanta Jaaluud iyo colkiisa, waxayna dhaheen kuwii yaqiinsanaa inay la kulmi Alle: badanaa intay koox yari ka adkaatay koox badan idinka Alle, Ilaahayna wuxuu la jiraa kuwa samra.

Aayadahan iyo kuwii ka horreeyeyba waxay ka warrami xaalkii banii israa'iil Muuse kadib, iyo qisadii dhaaluut oo hoggaaminayey iyo Jaaluud oo col gaalo ahaa watay, waxaana calaamadda wanaaggiisa ka mid ahaa in Alle u soo celiyey sanduuq malaa'igu xambaarsan tahay oy ku sugan tahay wax ka soo hadhay Muuse iyo Haaruun, wuxuuna Dhaaluut u caddeeyey colka in biyo lagu intixaami ciddii cabtana ayna ka mid ahayn, kaan cabbinna ka mid yahay, intii badnaydna cabtay oo khilaaftay amarkii, waxayna ku calaacaleen inayan awood u lahayn Jaaluud iyo colkiisa, kuwiise xaqa rumeeyey waxay dheheen: immisaa cid yari mid badan ka adkaatay idanka Alle. **[Al-Baqarah: 248-249].**

وَلَمَّا بَرَزُواْ لِجَالُوتَ وَجُنُودِهِۦ قَالُواْ رَبَّنَآ أَفۡرِغۡ عَلَيۡنَا صَبۡرٗا وَثَبِّتۡ أَقۡدَامَنَا وَٱنصُرۡنَا عَلَى ٱلۡقَوۡمِ ٱلۡكَٰفِرِينَ ٢٥٠

250. Markay u soo muuqdeen Jaaluud iyo colkiisii waxay dhaheen mu'miniintii: Rabbigeenow ku shub korkannaga samir, sugna gomadahannaga noogana gargaar qoomka gaalada ah.

فَهَزَمُوهُم بِإِذۡنِ ٱللَّهِ وَقَتَلَ دَاوُۥدُ جَالُوتَ وَءَاتَىٰهُ ٱللَّهُ ٱلۡمُلۡكَ وَٱلۡحِكۡمَةَ وَعَلَّمَهُۥ مِمَّا يَشَآءُۗ وَلَوۡلَا دَفۡعُ ٱللَّهِ ٱلنَّاسَ

251. Markaasay (mu'miniintii) jabiyeen gaaladii idanka Alle, wuuna dilay Daawuud Jaaluud, wuxuuna siiyey Alle Daawuud xukun iyo xigmo (Nabinnimo

بَعۡضَهُم بِبَعۡضٖ لَّفَسَدَتِ ٱلۡأَرۡضُ وَلَٰكِنَّ ٱللَّهَ ذُو فَضۡلٍ عَلَى ٱلۡعَٰلَمِينَ ﴿٢٥١﴾

iyo cilmi) wuxuuna baray wuxuu doono, hadayan jirin ku reebidda Alle dadka qaarkood qaarka (kale) waxaa fasaadi lahaa dhulka hasa yeeshee Alle waa fadli u saaxiib "u deeqe" caalamka.

تِلۡكَ ءَايَٰتُ ٱللَّهِ نَتۡلُوهَا عَلَيۡكَ بِٱلۡحَقِّۚ وَإِنَّكَ لَمِنَ ٱلۡمُرۡسَلِينَ ﴿٢٥٢﴾

252. Taasi waa aayaadka Alle waana kugu akhriyaynaa si xaq ah, adiguna waxaad ka mid tahay kuwa la soo diray (rasuullada).

* تِلۡكَ ٱلرُّسُلُ فَضَّلۡنَا بَعۡضَهُمۡ عَلَىٰ بَعۡضٖۘ مِّنۡهُم مَّن كَلَّمَ ٱللَّهُۖ وَرَفَعَ بَعۡضَهُمۡ دَرَجَٰتٖۚ وَءَاتَيۡنَا عِيسَى ٱبۡنَ مَرۡيَمَ ٱلۡبَيِّنَٰتِ وَأَيَّدۡنَٰهُ بِرُوحِ ٱلۡقُدُسِۗ وَلَوۡ شَآءَ ٱللَّهُ مَا ٱقۡتَتَلَ ٱلَّذِينَ مِنۢ بَعۡدِهِم مِّنۢ بَعۡدِ مَا جَآءَتۡهُمُ ٱلۡبَيِّنَٰتُ وَلَٰكِنِ ٱخۡتَلَفُواْ فَمِنۡهُم مَّنۡ ءَامَنَ وَمِنۡهُم مَّن كَفَرَۚ وَلَوۡ شَآءَ ٱللَّهُ مَا ٱقۡتَتَلُواْ وَلَٰكِنَّ ٱللَّهَ يَفۡعَلُ مَا يُرِيدُ ﴿٢٥٣﴾

253. Kuwaasu waa rasuulladi waana ka fadilnaa qaarkood qaarka (kale), waxaa ka mid ah kuwo uu la hadlay Alle, wuuna kor yeelay qaarkood darajooyin, waxaana siinnay Ciise binu Maryama xujooyin, waxaana ku xoojinnay ruuxdii daahirka ahayd malaku Jibriil, hadduu Alle doono isma laayeen kuwii ka dambeeyay intay u timid xujooyin kadib, laakiin way is khilaafeen, waxaa ka mid ah mid rumeeyay (xaqa) waxaana ka mid ah mid ka gaaloobay, hadduu Alle doonana isma laayeen. Laakiin Alle wuxuu falaa wuxuu doono.

Waxay ku tusin aayaddu sugnaanshaha mu'miniinta iyo sida Alle ugu gargaaray, Nabi Daawuudna u sharrifay una dilay Jaaluud, xigmadda Alle na waxaa ka mid ah in qaarkood qaar lagu celiyo, rassuullada Alle na qaar baa qaar ka fadilan, sida Nabiga Muxamed ah iyo Nabi Muuse iyo Nabi Ciise. **[Al-Baqarah: 250-253].**

254. Kuwa (xaqa) rumeeyow nafaqeeya (bixiya) waxaan idinku arzuqnay qaarkood ka hor imaatin maalin (qiyaamada) oon gadasho jirin iyo saaxiibtinimo iyo shafeeco (midna), gaaladuna iyaga unbaa daalimiin ah.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ أَنفِقُواْ مِمَّا رَزَقْنَـٰكُم مِّن قَبْلِ أَن يَأْتِىَ يَوْمٌ لَّا بَيْعٌ فِيهِ وَلَا خُلَّةٌ وَلَا شَفَـٰعَةٌ ۗ وَٱلْكَـٰفِرُونَ هُمُ ٱلظَّـٰلِمُونَ ﴿٢٥٤﴾

255. Allaah, ku xaq lugu caabudo ma jiro oon isaga ahayn, waana Allaha nool, khalqigana maamula, ma qabato lulmo iyo hurdo (midna) wuxuuna iska leeyahay waxa samooyinka ku sugan iyo dhulka, waa kuma kan ka shafeeci agtiisa (Alle) idankiisa mooyee, wuxuu og yahay (Alle) waxa dadka hortooda ah iyo waxa ka dambeeya mana koobaan wax cilmigiisa ka mid ah, wuxuu Alle doono mooyee, wuuna u waasac noqday kursigiisu samaawaadka iyo dhulka, mana cusleeyo ilaalinteedu, Alle na waa sarreeye wayn.

ٱللَّهُ لَآ إِلَـٰهَ إِلَّا هُوَ ٱلْحَىُّ ٱلْقَيُّومُ ۚ لَا تَأْخُذُهُۥ سِنَةٌ وَلَا نَوْمٌ ۚ لَّهُۥ مَا فِى ٱلسَّمَـٰوَٰتِ وَمَا فِى ٱلْأَرْضِ ۗ مَن ذَا ٱلَّذِى يَشْفَعُ عِندَهُۥٓ إِلَّا بِإِذْنِهِۦ ۚ يَعْلَمُ مَا بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَمَا خَلْفَهُمْ ۖ وَلَا يُحِيطُونَ بِشَىْءٍ مِّنْ عِلْمِهِۦٓ إِلَّا بِمَا شَآءَ ۚ وَسِعَ كُرْسِيُّهُ ٱلسَّمَـٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ ۖ وَلَا يَـُٔودُهُۥ حِفْظُهُمَا ۚ وَهُوَ ٱلْعَلِىُّ ٱلْعَظِيمُ ﴿٢٥٥﴾

Aayadda hore waxay sugi inay habboon tahay in wax wanaagsan la hormarsado qiyaame ka hor, maxaa yeelay waa maalinaan ganacsi iyo saaxiibtinimo iyo shafeeco midna jirin cid Alle shafeeco u idmo mooyee, gaalana iyaga unbaa daalimiin ah, tan kale aayadda dambe waxaa la dhahaa aayatulkursi waxayna ka mid tahay aayadaha quraanka u weyn, waxaana fadligeeda ku soo arooray xadiithyo badan, waxaana ka mid ah: in Nabigu warsaday Ubayi binu Kacab: aayaddee u weyn quraanka oo uu yidhi: Alle iyo Rasuulkiisaa og, markuu ku cel celiyeyna uu yidhi: aayatul kursi. Markaas Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) yidhi: ha kuu shifoobo cilmigu Abaa Mundirow. Waxaa wariyey imaam Muslim.

Waxayna kulansatay aayaddu toban arrimood oo muhiim ah oos garan ciddii aad u fiirisa oo fahmida. **[Al-Baqarah: 254-255].**

لَآ إِكۡرَاهَ فِي ٱلدِّينِۖ قَد تَّبَيَّنَ ٱلرُّشۡدُ مِنَ ٱلۡغَيِّۚ فَمَن يَكۡفُرۡ بِٱلطَّٰغُوتِ وَيُؤۡمِنۢ بِٱللَّهِ فَقَدِ ٱسۡتَمۡسَكَ بِٱلۡعُرۡوَةِ ٱلۡوُثۡقَىٰ لَا ٱنفِصَامَ لَهَاۗ وَٱللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٢٥٦﴾

256. Igraah (qasab) ma aha diinta galiddeedu, hanuunku (iimaanku) waa ka caddaaday (soocan yahay) baadida (gaalnimada), ruuxiise diida dhaaquut (shayaadiinta iyo xuma fare wixii ah) oo rumeeya Alle wuxuu qabsaday xadhig (guntin) sugan oo adag (islaamka) oon go'ayn, Alle na waa maqle og.

ٱللَّهُ وَلِيُّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ يُخۡرِجُهُم مِّنَ ٱلظُّلُمَٰتِ إِلَى ٱلنُّورِۖ وَٱلَّذِينَ كَفَرُوٓاْ أَوۡلِيَآؤُهُمُ ٱلطَّٰغُوتُ يُخۡرِجُونَهُم مِّنَ ٱلنُّورِ إِلَى ٱلظُّلُمَٰتِۗ أُوْلَٰٓئِكَ أَصۡحَٰبُ ٱلنَّارِۖ هُمۡ فِيهَا خَٰلِدُونَ ﴿٢٥٧﴾

257. Alle waa u gargaaraha kuwa rumeeyey xaqa, wuxuuna ka bixiyaa mugdiga (gaalnimada) una bixiyaa nuurka (iimaanka), kuwa gaaloobayna gargaarahoodu waa dhaaquut (xumaan fare) wuxuuna ka bixiyaa nuurka una bixiyaa mugdiga (gaalnimada), kuwaasina waa ehelka naarta wayna ku waari dhexdeeda.

أَلَمۡ تَرَ إِلَى ٱلَّذِي حَآجَّ إِبۡرَٰهِـۧمَ فِي رَبِّهِۦٓ أَنۡ ءَاتَىٰهُ ٱللَّهُ ٱلۡمُلۡكَ إِذۡ قَالَ إِبۡرَٰهِـۧمُ رَبِّيَ ٱلَّذِي يُحۡيِۦ وَيُمِيتُ قَالَ أَنَا۠ أُحۡيِۦ وَأُمِيتُۖ قَالَ إِبۡرَٰهِـۧمُ فَإِنَّ ٱللَّهَ يَأۡتِي بِٱلشَّمۡسِ مِنَ ٱلۡمَشۡرِقِ فَأۡتِ بِهَا مِنَ ٱلۡمَغۡرِبِ فَبُهِتَ ٱلَّذِي كَفَرَۗ وَٱللَّهُ لَا يَهۡدِي ٱلۡقَوۡمَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٢٥٨﴾

258. Ka warran (warkiisu ma ku soo gaadhay) kii kula murmay Nabi Ibraahim Allehiis, (waa Namruud) in Alle siiyey xukun darteed markuu Nabi Ibraahim yidhi Allehay waa nooleeye dile, markaa yidhi (gaalkii) amba waan nooleeyaa oon dilaa, markaas Nabi Ibraahim yidhi Alle wuxuu ka keeni qoraxda bari ee ka keen galbeed, markaasaa la wareeriyey (oo aamusay) kii gaaloobay, Alle na ma hanuuniyo qoom daalimiin ah.

Cidna xoog iyo qasab diinta qalbigiisa laguma galiyo illeen xaqu waa cad yahaye, ruuxiise raaca diinta islaamka ee xaqa ah wuxuu qabsaday xadhig adag oon go'ayn, Allana waa gargaaraha mu'miniinta, hanuuniyana, shaydaanna waa gargaaraha gaalada, sida namruudkii la dooday Nabi Ibraahim markuu kibray oo isla weynaaday sheegtayna awood markii dambase ceeboobay oo wareerey oo hadli waayey, saasina waa caadada gaalada iyo xumaan farayaasha, wax nooleys iyo dilse ma aha wuxuu sheegtay oo ah inuu labo nin midna gawraco midna sii daayo, ciddii awood ku faanta wax ha ka badasho xukunka Alle iyo khalqigiisa, mana jirto. **[Al-Baqarah: 256-258].**

أَوْ كَٱلَّذِى مَرَّ عَلَىٰ قَرْيَةٍ وَهِىَ خَاوِيَةٌ عَلَىٰ عُرُوشِهَا قَالَ أَنَّىٰ يُحْىِۦ هَٰذِهِ ٱللَّهُ بَعْدَ مَوْتِهَا ۖ فَأَمَاتَهُ ٱللَّهُ مِاْئَةَ عَامٍ ثُمَّ بَعَثَهُۥ ۖ قَالَ كَمْ لَبِثْتَ ۖ قَالَ لَبِثْتُ يَوْمًا أَوْ بَعْضَ يَوْمٍ ۖ قَالَ بَل لَّبِثْتَ مِاْئَةَ عَامٍ فَٱنظُرْ إِلَىٰ طَعَامِكَ وَشَرَابِكَ لَمْ يَتَسَنَّهْ ۖ وَٱنظُرْ إِلَىٰ حِمَارِكَ وَلِنَجْعَلَكَ ءَايَةً لِّلنَّاسِ ۖ وَٱنظُرْ إِلَى ٱلْعِظَامِ كَيْفَ نُنشِزُهَا ثُمَّ نَكْسُوهَا لَحْمًا ۚ فَلَمَّا تَبَيَّنَ لَهُۥ قَالَ أَعْلَمُ أَنَّ ٱللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿٢٥٩﴾

259. Ka warran kii maray magaalo iyadoo la duntay darbigeedii (oo cidla ah) markaas yidhi sidee Alle u nooleyn middan dhimasho (kharaab) kadib markaasaa Alle dilay boqol sano (qadarkeed) markaasuu soo bixiyey wuxuuna ku yidhi immisaad nagaatay adigoo mayd ah, uuna yidhi waxaan nagaaday maalin ama maalin qaarkeed, uu kuna yidhi (Alle): waxaad nagaatay boqol sano ee day cuntadaada iyo cabiddaada, oon doorsoomin, day dameerkaaga waxaan kaaga yeeleynaa calaamo dadka, day lafaha sidaan u soo kor yeeleyno (u nooleyn) una huwinayno hilib markuu u caddaaday xaalku wuxuu yidhi: waxaan ogahay in Alle wax walba karo.

Waxaa la wariyey in nin la dhihi jirey Cuzayr uu maray magaalada Baytul Maqdis oo la kharribay, markaas yidhi sidee Alle u noolayn kharaab kadib, markaas Alle dilay soona nooleeyey muddo kadib, tusayna qudrada Alle iyo siduu wax u nooleeyo, awoodda Alle na ma aha wax la shakiyo ama la fogeysto, cidda xaqa rumeysana waxaa looga baahan yahay u hoggaansanka Alle kor iyo hoosba illeen waa wax walba karee. **[Al-Baqarah: 259].**

وَإِذْ قَالَ إِبْرَٰهِـۧمُ رَبِّ أَرِنِى كَيْفَ تُحْىِ ٱلْمَوْتَىٰ ۖ قَالَ أَوَلَمْ تُؤْمِن ۖ قَالَ بَلَىٰ وَلَٰكِن لِّيَطْمَئِنَّ قَلْبِى ۖ قَالَ فَخُذْ أَرْبَعَةً مِّنَ ٱلطَّيْرِ فَصُرْهُنَّ إِلَيْكَ ثُمَّ ٱجْعَلْ عَلَىٰ كُلِّ جَبَلٍ مِّنْهُنَّ جُزْءًا ثُمَّ ٱدْعُهُنَّ يَأْتِينَكَ سَعْيًا ۚ وَٱعْلَمْ أَنَّ ٱللَّهَ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٢٦٠﴾

260. Xusuuso markuu yidhi Nabi Ibraahim: Allow i tusi sidaad u nooleyso waxa dhinta uuna yidhi miyaadan rumeynin (xaqa) oo uu yidhi waan rumeeyey laakiin (waxaan doonay) inuu xasilo qalbigaygu markaas (Alle) yidhi: qaad afar shimbirood una iil xaggaaga (jarjar) kadibna yeel buur kasta qayb ka mid ah, markaas u yeedh way kuu imaan iyagoo ordi, ogoowna in Alle adkaade falsan yahay.

مَّثَلُ ٱلَّذِينَ يُنفِقُونَ أَمْوَٰلَهُمْ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ كَمَثَلِ حَبَّةٍ أَنۢبَتَتْ سَبْعَ سَنَابِلَ فِى كُلِّ سُنۢبُلَةٍ مِّا۟ئَةُ حَبَّةٍ ۗ وَٱللَّهُ يُضَٰعِفُ لِمَن يَشَآءُ ۗ وَٱللَّهُ وَٰسِعٌ عَلِيمٌ ﴿٢٦١﴾

261. Kuwa ku bixiya xoolahooda jidka Alle waxay la mid yihiin xabbad (masaggo ah) oo bixisay todobo sabuul, sabuul kastana bixiyey boqol xabbo, Alle waa u laab laabaa (ajirka) cidduu doono Alle na waa deeq badane og.

Nabi Ibraahim wuu rumeysnaa awoodda Alle, wuxuuse u warsaday xaalkaas in iimaanku u sii kordho, mase aha shaki siduu Nabiguba yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): annagaa ka mudan shaki (Nabi) Ibraahim markuu yidhi Allow i tus saad wax u nooleyso. Bukhaari iyo Muslim baa wariyey. Tan kale cidda wax wanaagsan hor marsata Alle wuu u laab laabi ajirka sida xabbad masaggo ah oo dhulka lagu riday oo soo bixisa sabuullo badan, waxaana xadiith ku sugnaaday: ciddii ku baxsata nafaqo dheeraad ah jidka Alle waxaa loo laablaabi illaa toddobo boqol oo jeer. Ibnu Cabaasna wuxuu yidhi: jahaadka iyo xajku waxay dirhamka u laablaabaan ilaa todobo boqol oo jeer. **[Al-Baqarah: 260-261].**

ٱلَّذِينَ يُنفِقُونَ أَمْوَٰلَهُمْ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ ثُمَّ لَا يُتْبِعُونَ مَآ أَنفَقُوا۟ مَنًّا وَلَآ أَذًى ۙ لَّهُمْ أَجْرُهُمْ عِندَ رَبِّهِمْ وَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿٢٦٢﴾

262. Kuwa ku bixiya xoolahooda jidka Alle markaasna raacinnin waxay bixiyeen manno iyo dhib waxay ku mudan ajrigooda Rabbigood agtiisa, cabsina korkooda ma ahaato, mana murugoodaan.

263. Hadal wanaagsan iyo dhaafid (saamaxaad) yaa ka khayr badan sadaqo uu raaco dhib, Alle na waa hodan dul badan.

* قَوْلٌ مَّعْرُوفٌ وَمَغْفِرَةٌ خَيْرٌ مِّن صَدَقَةٍ يَتْبَعُهَآ أَذًى ۗ وَٱللَّهُ غَنِىٌّ حَلِيمٌ ﴿٢٦٣﴾

264. Kuwa xaqa rumeeyow ha ku burinnina sadaqadiinna manno iyo dhib sida kan u bixiya xoolihiisa istuska dadka, oo aan rumeynin Alle iyo maalinta aakhiro, wuxuuna la mid yahay sida sallax korkiisa carro tahay oo roob badan heley oo ka tagtay isagoo sibibiq ah (madhan) ma karaan kuwaasu wax ka mid ah waxay kasbadeen (ajri kama helaan) Alle na ma hanuuniyo qoom gaalo ah.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تُبْطِلُوا۟ صَدَقَـٰتِكُم بِٱلْمَنِّ وَٱلْأَذَىٰ كَٱلَّذِى يُنفِقُ مَالَهُۥ رِئَآءَ ٱلنَّاسِ وَلَا يُؤْمِنُ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْـَٔاخِرِ ۖ فَمَثَلُهُۥ كَمَثَلِ صَفْوَانٍ عَلَيْهِ تُرَابٌ فَأَصَابَهُۥ وَابِلٌ فَتَرَكَهُۥ صَلْدًا ۖ لَّا يَقْدِرُونَ عَلَىٰ شَىْءٍ مِّمَّا كَسَبُوا۟ ۗ وَٱللَّهُ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلْكَـٰفِرِينَ ﴿٢٦٤﴾

Wax bixinta iyo sadaqadu waa waxyaalaha waaweyn ee diinta lslaamku fartay, hasa yeeshee waa inaan sheeg sheeg iyo ku manneysi la raacinnin, sadaqaduna mar hadday tahay dar Alle oo istustus iyo dhib loo bixinnin abaalkeedu waa cabsi iyo murug la'aan, haddaadan wax bixineynina waxaa wanaagsan hadal fiican, istustusna cidhibtiisu waa wax la'aan, Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: ma galo jannada caaqa (caasiga waalidka) iyo ka wax ku mannaysta (dadka) iyo khamri daa'ime, iyo beeniyaha qaddarka (Alle). Waxaa wariyey imaam Axmed. **[Al-Baqarah: 262-264].**

265. Kuwa ku bixiya xoolahooda doonidda raalli ahaanshaha Alle iyo yaqiinsi naftooda (khayrka) waxay la mid yihiin beer ku taal meel sare oo uu helay roob badan, oo markaas keentay cunnadeedii laban laab, hadduusan roob badan helinna uu helo roob yar (shuux), Alle na waxaad camal falaysaan wuu arkaa.

وَمَثَلُ ٱلَّذِينَ يُنفِقُونَ أَمْوَٰلَهُمُ ٱبْتِغَآءَ مَرْضَاتِ ٱللَّهِ وَتَثْبِيتًا مِّنْ أَنفُسِهِمْ كَمَثَلِ جَنَّةٍۭ بِرَبْوَةٍ أَصَابَهَا وَابِلٌ فَـَٔاتَتْ أُكُلَهَا ضِعْفَيْنِ فَإِن لَّمْ يُصِبْهَا وَابِلٌ فَطَلٌّ ۗ وَٱللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿٢٦٥﴾

أَيَوَدُّ أَحَدُكُمْ أَن تَكُونَ لَهُۥ جَنَّةٌ مِّن نَّخِيلٍ وَأَعْنَابٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ لَهُۥ فِيهَا مِن كُلِّ ٱلثَّمَرَٰتِ وَأَصَابَهُ ٱلْكِبَرُ وَلَهُۥ ذُرِّيَّةٌ ضُعَفَآءُ فَأَصَابَهَآ إِعْصَارٌ فِيهِ نَارٌ فَٱحْتَرَقَتْ ۗ كَذَٰلِكَ يُبَيِّنُ ٱللَّهُ لَكُمُ ٱلْءَايَٰتِ لَعَلَّكُمْ تَتَفَكَّرُونَ ﴿٢٦٦﴾

266. Ma jecel yahay midkiin inay u ahaato beer timir iyo canabyo ah oy dareeri dhexdeeda wabiyaal oo uu ku leeyahay dhexdeeda wax kastoo midho ah ayna hayso da'weyni uuna leeyahay carruur tabar yar oo markaas beertii asiibto (ku dhacdo) dabayl daran oo dab wadata oo gubatay beertii, saasuu Alle idiinku caddeeyaa aayaadkiisa si aad u fikirtaan.

Dar Alle oo wax loo bixiyo waxay labanlaabtaa camalka ajrigiisa, istus tuska iyo niyo xumiduna waxay gubtaa camalka sida beerta aayaddu tilmaantay iyo siduu ugu baahan yahay ninkii lahaa, waxaana sugnaatay in macnaha aayaaddan Cumar warsaday asaxaabtii oy dhaheen Alle ayaa og, oo uu cadhooday yidhina dhaha ma naqaan ama waan naqaannaa, markaas Ibnu Cabbaas yidhi: waa ruux camal fiican falay oo shaydaan duufsaday. Waxaa wariyey Bukhaari. **[Al-Baqarah: 265-266].**

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ أَنفِقُوا۟ مِن طَيِّبَٰتِ مَا كَسَبْتُمْ وَمِمَّآ أَخْرَجْنَا لَكُم مِّنَ ٱلْأَرْضِ ۖ وَلَا تَيَمَّمُوا۟ ٱلْخَبِيثَ مِنْهُ تُنفِقُونَ وَلَسْتُم بِـَٔاخِذِيهِ إِلَّآ أَن تُغْمِضُوا۟ فِيهِ ۚ وَٱعْلَمُوٓا۟ أَنَّ ٱللَّهَ غَنِىٌّ حَمِيدٌ ﴿٢٦٧﴾

267. Kuwa xaqa rumeeyow wax ka bixiya ka wanaagsan waxaad kasbateen, iyo waxaan idinka soo bixinnay dhulka, hana u qasdina kan xun inaad wax ka bixisaan, oo idinkuba aydaan qaadateen, inaad indho laabtaan mooyee, ogaadana in Alle yahay hodan la mahdiyo.

ٱلشَّيْطَٰنُ يَعِدُكُمُ ٱلْفَقْرَ وَيَأْمُرُكُم بِٱلْفَحْشَآءِ ۖ وَٱللَّهُ يَعِدُكُم مَّغْفِرَةً مِّنْهُ وَفَضْلًا ۗ وَٱللَّهُ وَٰسِعٌ عَلِيمٌ ﴿٢٦٨﴾

268. Shaydaanku wuxuu idiin yaboohi faqri, wuxuuna idin fari xumaan, Alle na wuxuu idiin yaboohi dambi dhaaf iyo fadli, Alle na waa waasac (deeqdiisu) waxna og.

269. Wuxuu siiyaa xigmo cidduu doono, ruuxii la siiyo xigmona waxaa la siiyey khayr badan, wax waantooba oon kuwa caqliga leh ahaynna ma jiro.

يُؤْتِي ٱلْحِكْمَةَ مَن يَشَآءُ ۚ وَمَن يُؤْتَ ٱلْحِكْمَةَ فَقَدْ أُوتِيَ خَيْرًا كَثِيرًا ۗ وَمَا يَذَّكَّرُ إِلَّآ أُو۟لُوا۟ ٱلْأَلْبَٰبِ ﴿٢٦٩﴾

Aayaddan waxay fari in xoolaha xalaasha ee fiican wax laga bixiyo, oon ka xun loo soocin bixin iyo shaydaanku ku cabsi galin dadka baahi iyo faqri, Alle na u yaboohi dambi dhaaf iyo dheeraad, cidduu doonana uu siin caqli iyo xikmad uu wanaagga ku raaco, waana khayr iyo sharaf wayn, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Alle wuxuu idiin qaybiyey akhlaaqda siduu idiin ku qaybiyey arzaaqda, Alle na wuu siiyaa adduun ruuxuu jecel yahay iyo miduusan jecleynba, mase siiyo diinka miduusan jecleyn, ruuxuu siiyo diin wuu jeclaaday... Intuu ka dhaho: ruuxii ka bixiya xaaraam, ama sadaqeeya lama aqbalo, haduu ka tagana wuxuu ku noqon sahay naareed. Waxaa wariyey imaam Axmed. **[Al-Baqarah: 267-269].**

270. Waxaad bixisaan oo nafaqo ah (sadaqo) amaad ku nadartaan oo nadir ah Alle waa og yahay, daalimiinna gargaare uma sugnaannin.

وَمَآ أَنفَقْتُم مِّن نَّفَقَةٍ أَوْ نَذَرْتُم مِّن نَّذْرٍ فَإِنَّ ٱللَّهَ يَعْلَمُهُۥ ۗ وَمَا لِلظَّٰلِمِينَ مِنْ أَنصَارٍ ﴿٢٧٠﴾

271. Haddaad muujisaan sadaqaadka waa fiican tahay, haddaadse qarisaan ood siisaan fuqarada yaa idiin khayr badan, wuuna asturi Alle xumaantiinna (dambiga) Alle na waxaad falaysaan wuu og yahay.

إِن تُبْدُوا۟ ٱلصَّدَقَٰتِ فَنِعِمَّا هِىَ ۖ وَإِن تُخْفُوهَا وَتُؤْتُوهَا ٱلْفُقَرَآءَ فَهُوَ خَيْرٌ لَّكُمْ ۚ وَيُكَفِّرُ عَنكُم مِّن سَيِّـَٔاتِكُمْ ۗ وَٱللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرٌ ﴿٢٧١﴾

272. Korkaaga ma saarra hanuunintoodu, Alle ayaase hanuuniya cidduu doono, waxaad bixinaysaan oo khayr ah naftiinnaa iska leh, umana bixisaan doonid waji Alle mooyee, waxaad bixisaan oo khayr ahna waa laydiin oofin, idinkoon laydin dulmiyeyn.

* لَّيْسَ عَلَيْكَ هُدَىٰهُمْ وَلَٰكِنَّ ٱللَّهَ يَهْدِى مَن يَشَآءُ ۗ وَمَا تُنفِقُوا۟ مِنْ خَيْرٍ فَلِأَنفُسِكُمْ ۚ وَمَا تُنفِقُونَ إِلَّا ٱبْتِغَآءَ وَجْهِ ٱللَّهِ ۚ وَمَا تُنفِقُوا۟ مِنْ خَيْرٍ يُوَفَّ إِلَيْكُمْ وَأَنتُمْ لَا تُظْلَمُونَ ﴿٢٧٢﴾

Wixii sadaqa ah oo la bixin ama wixii lagu nadro iyo camal walba Alle waa og yahay, muujinta sadaqa iyo qarinteeduba waa bannaan tahay, waxaase khayr badan qarinteeda, hanuunkana Alle ayaa haysta, Nabigana waxaan gaadhsiis ahayn ma saarro wixii dar Alle loo bixiyaana Alle wuu ka abaalmarin, "waxaana todobada la hadhayn ka mid ah ciddii sadaqo qarsoon bixisa". Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim. **[Al-Baqarah: 270-272].**

لِلْفُقَرَآءِ ٱلَّذِينَ أُحْصِرُوا۟ فِى سَبِيلِ
ٱللَّهِ لَا يَسْتَطِيعُونَ ضَرْبًا فِى ٱلْأَرْضِ
يَحْسَبُهُمُ ٱلْجَاهِلُ أَغْنِيَآءَ مِنَ ٱلتَّعَفُّفِ
تَعْرِفُهُم بِسِيمَىٰهُمْ لَا يَسْـَٔلُونَ ٱلنَّاسَ
إِلْحَافًا ۗ وَمَا تُنفِقُوا۟ مِنْ خَيْرٍ فَإِنَّ ٱللَّهَ
بِهِۦ عَلِيمٌ ﴿٢٧٣﴾

273. (Waxaa muta sadaqadaas) fuqarada lagu koobay jidka Alle (jahaadka) oon karin inay dhulka ku safraan (macaash raadin), wuxuuna u malayn kaan ogayn hodan dhawrsanaantooda darteed, waxaadse ku garan calaamadooda, umana waydiiyaan dadka ku celcelin, waxaad bixisaan oo khayr ah Alle waa og yahay (oo ka jasayn).

ٱلَّذِينَ يُنفِقُونَ أَمْوَٰلَهُم بِٱلَّيْلِ وَٱلنَّهَارِ
سِرًّا وَعَلَانِيَةً فَلَهُمْ أَجْرُهُمْ عِندَ رَبِّهِمْ
وَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿٢٧٤﴾

274. Kuwa bixiya xoolahooda habeen iyo dharaarba qarsoodi iyo muuqaalba waxay ku mudan ajirkooda Rabbigood agtiis, cabsina korkooda ma ahaato iyo murug midna.

Wax bixintu waa lagama maarmaan, waajib ahaatayaa iyo siin kale ahaatayaaba, adayggeeda iyo ahmiyaddeeda darteed ayuu quraanku wax badan soo celceliyey, Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wax badan u faray uguna hanuuniyey, taasina waxay ku tusin in diinta islaamku tahay diin xidhiidhin iyo taakulayn, sida fuqarada aan shaqaynayn, ee jidka Alle ku jahaadi, cidna wax warsannin loona malaynayn fuqaro, oyse ka muuqato dhibaato, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: ruuxii is dhawra Alle ayaa dhawra, ruuxii is hodan yeelana Alle ayaa hodmiya, ruuxii wax waydiista isagoo hanta wax la eg shan wiqiyadoodna wuxuu u waydiiyey dadka cel celin. Waxaa weriyay Imaam Axmed. **[Al-Baqarah: 273-274].**

ٱلَّذِينَ يَأۡكُلُونَ ٱلرِّبَوٰاْ لَا يَقُومُونَ إِلَّا
كَمَا يَقُومُ ٱلَّذِي يَتَخَبَّطُهُ ٱلشَّيۡطَٰنُ
مِنَ ٱلۡمَسِّۚ ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمۡ قَالُوٓاْ إِنَّمَا ٱلۡبَيۡعُ
مِثۡلُ ٱلرِّبَوٰاْۗ وَأَحَلَّ ٱللَّهُ ٱلۡبَيۡعَ وَحَرَّمَ
ٱلرِّبَوٰاْۚ فَمَن جَآءَهُۥ مَوۡعِظَةٞ مِّن رَّبِّهِۦ
فَٱنتَهَىٰ فَلَهُۥ مَا سَلَفَ وَأَمۡرُهُۥٓ إِلَى ٱللَّهِۖ
وَمَنۡ عَادَ فَأُوْلَٰٓئِكَ أَصۡحَٰبُ ٱلنَّارِۖ هُمۡ
فِيهَا خَٰلِدُونَ ٢٧٥

275. Kuwa cuna ribada kama istaagaan (qubuurahooda) siduu u istaago mid la dhici shaydaan taabashadiis mooyee, waxaana ugu wacan arrintaas inay dhaheen beecu waa sida ribada, wuu banneeyey Alle beeca wuxuuna xarrimay ribada, ruuxuu u yimaado waano Allehiis oo reebtooma wuxuu mudan wixii horreeyey, amarkiisana waxaa (loo bandhigi) Alle, ruuxiise ku noqda (ribada) kuwaasu waa asaxaabta (ehelka) naarta wayna ku waari dhexdeeda.

يَمۡحَقُ ٱللَّهُ ٱلرِّبَوٰاْ وَيُرۡبِي ٱلصَّدَقَٰتِۗ
وَٱللَّهُ لَا يُحِبُّ كُلَّ كَفَّارٍ أَثِيمٍ ٢٧٦

276. Wuxuu tiraa Alle ribada wuxuuna badiyaa (barakeeyaa) sadaqooyinka, Alle na ma jecla gaalnimo badane dambi badan dhammaantiis.

Diinta islaamku waa diin fari xalaal cunka, shaqada fiican iyo istaakulaynta, mana oggola xaaraan cunka, iskhayaamidda iyo dulmiga, ribaduna waa xoolaha dadkoo xaq darro iyo dulsaar lagu cuno, waxaana lagu ciqaabi dhidhicid sida ruux waalan qiyaamada, cadaab iyo barako darro, illeen Alle kala gadashaduu banneeyaa, ribadana wuu xarrimaa, mana aha siday gaaladu sheegeen in beeca iyo ribadu isku mid yihiin. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: waxaan u imid habeenkii lay dheelmay qaar calooshoodu tahay sida guryo oo abeesana dhex socoto, waxaana dhahay: waayo kuwaasi Jibriilow? Wuxuu yidhi: kuwaasi waa kuwa cuna ribada. Waxaa wariyey Imaam Axmed.

Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: kuwa cuna ribada waxaa la soo bixiyaa qiyaamada iyagoo waalan oo neefaysan. Waxaa weriyay Ibni-abii Xaatim. **[Al-Baqarah: 275-276].**

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ وَأَقَامُواْ ٱلصَّلَوٰةَ وَءَاتَوُاْ ٱلزَّكَوٰةَ لَهُمۡ أَجۡرُهُمۡ عِندَ رَبِّهِمۡ وَلَا خَوۡفٌ عَلَيۡهِمۡ وَلَا هُمۡ يَحۡزَنُونَ ﴿٢٧٧﴾

277. Kuwa rumeeyey xaqa, oo camal fiican falay, oo oogay salaadda, oo bixiyey sakada waxay ka mudan ajirkooda Allahood agtiisa, wax cabsi ah iyo murugana korkooda ma ahaato.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱتَّقُواْ ٱللَّهَ وَذَرُواْ مَا بَقِيَ مِنَ ٱلرِّبَوٰٓاْ إِن كُنتُم مُّؤۡمِنِينَ ﴿٢٧٨﴾

278. Kuwa xaqa rumeeyow ka dhawrsada Alle kana taga waxa hadhay oo ribo ah haddaad mu'min tihiin.

فَإِن لَّمۡ تَفۡعَلُواْ فَأۡذَنُواْ بِحَرۡبٖ مِّنَ ٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦۖ وَإِن تُبۡتُمۡ فَلَكُمۡ رُءُوسُ أَمۡوَٰلِكُمۡ لَا تَظۡلِمُونَ وَلَا تُظۡلَمُونَ ﴿٢٧٩﴾

279. Haddaydaan falin (sidaas) ogaada dagaal Alle iyo Rasuulkiisa, haddaad toobad keentaanna waxaad leedihiin raasamaalkii xoolihiinna, wax dulmin maysaan idinna laydin ma dulmayo.

وَإِن كَانَ ذُو عُسۡرَةٖ فَنَظِرَةٌ إِلَىٰ مَيۡسَرَةٖۚ وَأَن تَصَدَّقُواْ خَيۡرٞ لَّكُمۡ إِن كُنتُمۡ تَعۡلَمُونَ ﴿٢٨٠﴾

280. Haddii la helo isagoo caydh ah (kan wax lagu leeyahay) ha la sugo intay uga fududaato, haddaad sadaqaysataan (ka saamaxdaan) yaa idiin khayr badan haddaad og tihiin.

وَٱتَّقُواْ يَوۡمٗا تُرۡجَعُونَ فِيهِ إِلَى ٱللَّهِۖ ثُمَّ تُوَفَّىٰ كُلُّ نَفۡسٖ مَّا كَسَبَتۡ وَهُمۡ لَا يُظۡلَمُونَ ﴿٢٨١﴾

281. Kana dhawrsada maalinta laydiin soo celin Alle, kadibna qof walba loo oofin waxay kasbatay, lamana dulmiyo.

Ciddii xaqa rumeysa oo camal fiican la timaada, salaad, zako iyo wanaagga kalaba wuu ka helaa abaalkiisa fiican Alle agtiisa, isagoon cabsi iyo murugo arkayn ribadana saan horay u soo sheegnay waa camal xun iyo kasab xaaraan ah, mudanna in laga dheeraado, ciddii fashana ha u darbado dagaalka Alle iyo Rasuulkiisa, maxaadse u malayn cid Alle iyo Rasuulkiisu la dagaallameen.

Ibnu Cabbaas wuxuu sheegay in kan cuna ribada lagu dhihi qiyaamada: u qaado hubkaaga dagaal Alle. Ribaduna waa irrido badan tahay, waana masalooyinka aad u adag oy waajib tahay dadaal iyo ka fogaanta shakiga, waana in loo

naxariisto cidda daynta qabta ee faqiirka ah, intuu ka helana la sugo ama laga saamaxo, iyadoo loo darban qiyaamada illeen Alle ayaa loo noqone cid kastana ka abaal marin wuxuu kasbaday isagoon la dulmiyeyn. **[Al-Baqarah: 277-281].**

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِذَا تَدَايَنتُم بِدَيْنٍ
إِلَىٰٓ أَجَلٍ مُّسَمًّى فَٱكْتُبُوهُ ۚ وَلْيَكْتُب
بَّيْنَكُمْ كَاتِبٌۢ بِٱلْعَدْلِ ۚ وَلَا يَأْبَ كَاتِبٌ
أَن يَكْتُبَ كَمَا عَلَّمَهُ ٱللَّهُ ۚ فَلْيَكْتُبْ
وَلْيُمْلِلِ ٱلَّذِى عَلَيْهِ ٱلْحَقُّ وَلْيَتَّقِ ٱللَّهَ
رَبَّهُۥ وَلَا يَبْخَسْ مِنْهُ شَيْـًٔا ۚ فَإِن كَانَ
ٱلَّذِى عَلَيْهِ ٱلْحَقُّ سَفِيهًا أَوْ ضَعِيفًا
أَوْ لَا يَسْتَطِيعُ أَن يُمِلَّ هُوَ فَلْيُمْلِلْ
وَلِيُّهُۥ بِٱلْعَدْلِ ۚ وَٱسْتَشْهِدُواْ شَهِيدَيْنِ
مِن رِّجَالِكُمْ ۖ فَإِن لَّمْ يَكُونَا رَجُلَيْنِ
فَرَجُلٌ وَٱمْرَأَتَانِ مِمَّن تَرْضَوْنَ مِنَ
ٱلشُّهَدَآءِ أَن تَضِلَّ إِحْدَىٰهُمَا فَتُذَكِّرَ
إِحْدَىٰهُمَا ٱلْأُخْرَىٰ ۚ وَلَا يَأْبَ ٱلشُّهَدَآءُ
إِذَا مَا دُعُواْ ۚ وَلَا تَسْـَٔمُوٓاْ أَن تَكْتُبُوهُ
صَغِيرًا أَوْ كَبِيرًا إِلَىٰٓ أَجَلِهِۦ ۚ ذَٰلِكُمْ
أَقْسَطُ عِندَ ٱللَّهِ وَأَقْوَمُ لِلشَّهَـٰدَةِ
وَأَدْنَىٰٓ أَلَّا تَرْتَابُوٓاْ إِلَّآ أَن تَكُونَ
تِجَـٰرَةً حَاضِرَةً تُدِيرُونَهَا بَيْنَكُمْ
فَلَيْسَ عَلَيْكُمْ جُنَاحٌ أَلَّا تَكْتُبُوهَا ۗ
وَأَشْهِدُوٓاْ إِذَا تَبَايَعْتُمْ ۚ وَلَا يُضَآرَّ كَاتِبٌ
وَلَا شَهِيدٌ ۚ وَإِن تَفْعَلُواْ فَإِنَّهُۥ فُسُوقٌۢ
بِكُمْ ۗ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ ۖ وَيُعَلِّمُكُمُ ٱللَّهُ ۗ
وَٱللَّهُ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمٌ ﴿٢٨٢﴾

282. Kuwa xaqa rumeeyow haddaad wax kala daynsataan tan iyo muddo magacaaban qora hana idiin kala qoro dhexdiinna qof si cadaalad ah, yuuna diidin qore inuu u qoro siduu wax u baray Alle, ha qoro hana u yeedhiyo kan xaqa lagu leeyahay, hana ka dhawrsado Allaha Rabbigiisa ah, yuuna wax ka nuqsaaminin, hadduu yahay kan xaqa lagu leeyahay safiih ama tabar yare ama uusan karin inuu yeedhiyo ha u yeedhiyo waligiisu si caddaalad ah, maraggana ka yeela laba marag oo rag ah, haddaan laba nin la helinna nin iyo laba haween ood ka raalli tihiin marag ahaan; (laga yaabo) inay midi halmaanto oo tan kale xusuusiso, yeyna diidin maraggu haddii loo yeedho, hana ka daalina inaad qortaan wax yar iyo wax waynba tan iyo muddadiisa, saasaa ku cadaalad badan Alle agtiisa una sugan maragga una dhaw inaan la shakiyin, inay tahay tijaara (ganacsi) joogta aad maamulaysaan dhexdiinna oo korkiinna dhib (dambi) ma aha inaydaan qorin, marag u yeela

haddaad wax kala gadanaysaan, yaana la dhibin qore iyo marag midna, haddaad fashaan waa faasiqnimadiinna, ka dhawrsada Alle, waxna wuu idin bariye, Allana wax kasta waa og yahay.

Aayaddan waa aayad wayn, waxayna faraysaa in la qoro wixii la kala daynsan. Maragna loo yeelo, si caddaalad loo gaadho wax shaki ahna u dhicin, waxay kaloo fari in maragga, qoraha iyo kan daynta qaadanba dhabta iyo caddaalada ku dadaalaan, wax dhib ahna aan laysu gaysan, haddii cidda daynta qabta wax yeedhin waayo yari ama safiihnimo ama tabaryari awgeed waxaa tawallin waligiisa, waxaa sugnaatay in Nabigu galay magaalada Madiino iyagoo isu hor marin wuxuuna yidhi: ciddii salaf hormarin samaysa ha ku hor mariso beegid la yaqaan iyo miisaan la yaqaan tan iyo muddo la yaqaan. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim. **[Al-Baqarah: 282].**

283. Haddaad safar tihiin oydaan helin qore rahan la qibloodo (la kala qaato ha badasho qoridda) haduu qaarkiin aamino qaar ha siiyo kii la aaminay ammaanadiisa hana ka dhawrsado Allihiisa barbaariyey, hana qarinnina maragga, ruuxii qariyana wuu dambaabi qalbigiisu, Allena waxaad camalfashaan waa og yahay.

* وَإِن كُنتُمْ عَلَىٰ سَفَرٍ وَلَمْ تَجِدُوا۟
كَاتِبًا فَرِهَٰنٌ مَّقْبُوضَةٌ ۖ فَإِنْ أَمِنَ
بَعْضُكُم بَعْضًا فَلْيُؤَدِّ ٱلَّذِى ٱؤْتُمِنَ
أَمَٰنَتَهُۥ وَلْيَتَّقِ ٱللَّهَ رَبَّهُۥ ۗ وَلَا تَكْتُمُوا۟
ٱلشَّهَٰدَةَ ۚ وَمَن يَكْتُمْهَا فَإِنَّهُۥٓ ءَاثِمٌ
قَلْبُهُۥ ۗ وَٱللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ عَلِيمٌ ﴿٢٨٣﴾

284. Alle ayaa iska leh waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan, haddad muujisaan waxa naftiinna ku sugan ama qarisaan wuu idin ku xisaabin Alle, wuuna u dhaafi cidduu doono ama cadaabi cidduu doono, Alle na wax kasta wuu karaa.

لِّلَّهِ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِى ٱلْأَرْضِ ۗ
وَإِن تُبْدُوا۟ مَا فِىٓ أَنفُسِكُمْ أَوْ تُخْفُوهُ
يُحَاسِبْكُم بِهِ ٱللَّهُ ۖ فَيَغْفِرُ لِمَن يَشَآءُ
وَيُعَذِّبُ مَن يَشَآءُ ۗ وَٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ
قَدِيرٌ ﴿٢٨٤﴾

Haddiii safar la yahay oon la helayn qore waxaa la kala qaadan rahan "cudhaadh" haddii lays aamminana ha siiyo kii la aaminay ciddii aamintay xaqeeda, Allana haka yaabo, maraggana yaan la qarinnin, illeen ciddii qarisa wuu dambaabiye, Allana waa og yahay waxaad camal falaysaan. Samooyinka iyo dhulka waxa ku suganna Allaa iska leh, wax kastood fashaanna ama muuji ama qari ee mar walba Alle wuu ku xisaabin dadka, cidduu doonana wuu u dhaafi tuu doonana wuu cadaabi, illeen wax kasta wuu karaayee, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Alle wuxuu yidhi: hadduu doono addoonkaygu xumaan waxba ha u qorina intuu ka falo, hadduu falana mid u qora, hadduu wanaag doono ka dibna falin u qora wanaag, hadduu falana u qora toban wanaag. (Waa saxiix).

Markay aayaddan soo dagtayna asaxaabtii Nabiga aad bay u cabsadeen hasa yeeshee Allaa sheegay inaan cidna lagu mashaqayn waxayan karin, taasina waxay ku tusin caddaaladda iyo naxariista Alle, kaliya waxaa uun loo baahan yahay toosnaan iyo samo fal iyo Alle ku xidhnaan. **[Al-Baqarah: 283-284].**

ءَامَنَ ٱلرَّسُولُ بِمَآ أُنزِلَ إِلَيۡهِ مِن رَّبِّهِۦ وَٱلۡمُؤۡمِنُونَۚ كُلٌّ ءَامَنَ بِٱللَّهِ وَمَلَٰٓئِكَتِهِۦ وَكُتُبِهِۦ وَرُسُلِهِۦ لَا نُفَرِّقُ بَيۡنَ أَحَدٖ مِّن رُّسُلِهِۦۚ وَقَالُواْ سَمِعۡنَا وَأَطَعۡنَاۖ غُفۡرَانَكَ رَبَّنَا وَإِلَيۡكَ ٱلۡمَصِيرُ ٢٨٥

285. Wuu rumeeyey rasuulku wixii looga soo dajiyey xagga allihiis, mu'miniintuna (way rumeeyeen) dhammaanna waxay rumeeyeen Alle, malaa'igtiisa kutubtiisa iyo rasuulladiisa, mana kala geynayno mid ka mid ah rasuulladiisa dhexdooda, waxayna dhaheen waan maqalnay oon adeecnay, dhaafiddaada yaan ku waydiisanaynaa Allahannow, xaggaagaana loo ahaan.

لَا يُكَلِّفُ ٱللَّهُ نَفۡسًا إِلَّا وُسۡعَهَاۚ لَهَا مَا كَسَبَتۡ وَعَلَيۡهَا مَا ٱكۡتَسَبَتۡۗ رَبَّنَا لَا تُؤَاخِذۡنَآ إِن نَّسِينَآ أَوۡ أَخۡطَأۡنَاۚ رَبَّنَا وَلَا تَحۡمِلۡ عَلَيۡنَآ إِصۡرٗا كَمَا حَمَلۡتَهُۥ عَلَى ٱلَّذِينَ مِن قَبۡلِنَاۚ رَبَّنَا وَلَا تُحَمِّلۡنَا مَا لَا طَاقَةَ لَنَا بِهِۦۖ

286. Kuma mashaqeeyo Alle naf waxay awooddo mooyee, waxay mudan waxay kasbatay (oo wanaag ah) waxaana korkeeda ah waxay isu kasbatay (oo xumaana) Allow ha noo qabannin haddaan halmaanno ama gafno, Allow ha nagu xambaarin culays

وَٱعۡفُ عَنَّا وَٱغۡفِرۡ لَنَا وَٱرۡحَمۡنَآۚ أَنتَ مَوۡلَىٰنَا فَٱنصُرۡنَا عَلَى ٱلۡقَوۡمِ ٱلۡكَٰفِرِينَ ﴿٢٨٦﴾

saad ugu xambaartay kuwii naga horreeyey, allow hanagu xambaarin (dhibin) waxaannaan awood u lahayn, na cafina oo noo dhaaf noona naxariiso, adaa gargaarahannaga ahe, nooga gargaar qaarka gaalada ah.

Waxay ku tusin aayadda hore in xaqa aad u yeedhi aad dhab u rumeysid sida Alle u sheegay in rasuulku iyo mu'miniintuba rumeeyeen quraanka iyo xaqa Alle soo dajiyey, tan kale waajibnimada rumeynta Alle, malaa'igtiisa kutubtiisa iyo rasuulladiisa, oon la kala qaybinnin, xaqana la maqloo la adeeco, waxayna caddaysay arkaanta iimaanka badideed, aayadda kale waxay caddayn inaan Alle ku dhibin addoonkiisa waxuusan awoodin wax kastaba ha ahaadee, naf walbana ay mudan waxay kasbato, halmaansho iyo gafna Alle uga naxariistay dadka, culayskii ummadihii hore saarnaana laga fududeeyey, waxayna ku dhammaatay suuraddu warsi cafi Alle, dambidhaaf, naxariis iyo ka guulaysi gaalada.

Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: ruuxii akhriya labada aayadood ee suuradda baqara u dambeeya habeen way ku fillaan. Waxaa wariyey Bukhaari.

Waxaa kaloo Nabigu yidhi: waxaa laygu soo diray diin toosan oo fudud. Waxaa weriyay Axmad. **[Al-Baqarah: 285-286].**

Suurat Aali-Cimraan

سُورَةُ آلِ عِمۡرَانَ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. (Waxay ku tusin mucjisada quraanka).

الٓمٓ ﴿١﴾

2. Allaah, ku xaq lugu caabudo ma jiro oo aan isaga ahayn, ee nool, ee maamula khalqiga.

ٱللَّهُ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ٱلۡحَيُّ ٱلۡقَيُّومُ ﴿٢﴾

3. Wuxuu kugu dejiyey (Nabiyow) kitaabka (quraanka) si xaq ah, isagoo u rumeyn wixii ka horreeyey, wuxuuna soo dejiyey Alle tawreed iyo injiil.

نَزَّلَ عَلَيۡكَ ٱلۡكِتَٰبَ بِٱلۡحَقِّ مُصَدِّقٗا لِّمَا بَيۡنَ يَدَيۡهِ وَأَنزَلَ ٱلتَّوۡرَىٰةَ وَٱلۡإِنجِيلَ ﴿٣﴾

4. (Waqti) hore, iyagoo hanuun u ah dadka, wuxuuna soo dejiyey (Alle) furqaan (quraanka), kuwa ka gaaloobay aayaadka Alle waxay mudan cadaab daran, Allana waa adkaade aarsada.

مِن قَبۡلُ هُدٗى لِّلنَّاسِ وَأَنزَلَ ٱلۡفُرۡقَانَۗ إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ لَهُمۡ عَذَابٞ شَدِيدٞۗ وَٱللَّهُ عَزِيزٞ ذُو ٱنتِقَامٍ ﴿٤﴾

5. Allana kagama qarsoona korkiisa waxa dhulka iyo samada midna.

إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَخۡفَىٰ عَلَيۡهِ شَيۡءٞ فِي ٱلۡأَرۡضِ وَلَا فِي ٱلسَّمَآءِ ﴿٥﴾

6. Waana Allaha idinku sawira (abuura) riximyada (ilmo galeenka) siduu doono, ku xaq lugu caabudo ma jiro Allaah mooyee, waana adkaade falsan.

هُوَ ٱلَّذِي يُصَوِّرُكُمۡ فِي ٱلۡأَرۡحَامِ كَيۡفَ يَشَآءُۚ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ٱلۡعَزِيزُ ٱلۡحَكِيمُ ﴿٦﴾

Waxay soo degeen aayadahan mar wafdi ka yimid xagga najraan sannadkii sagaalaad ee hijrada, waxayna sugi kalinnimada Alle, noloshiisa, awooddiisa, xaqnimada quraanka, inuu u rumeyn kutubtii hore wixii xaq ah, iyo inuu hanuun u yahay dadka, xaqa iyo baadilkana uu kala bixin, ciddii xaqa diiddana uu ciqaabi Alle, wax kaga qarsoomaa uusan jirin cir iyo dhul midna. Siduu doonana uu dadka ugu abuuro uurka hooyo, Nawaas binu Samcaan waxaa laga wariyey inuu yidhi: Rasuulkii Alle (naxariis iyo nabdgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: waxaa la keeni quraanka maalinta qiyaame iyo ehelkiisii ku camal fali jiray, isagooy hor socoto suuratu Baqara iyo Aali Cimraan. **[Aali-Cimraan, 1-6]**

هُوَ ٱلَّذِىٓ أَنزَلَ عَلَيْكَ ٱلْكِتَٰبَ مِنْهُ ءَايَٰتٌ مُّحْكَمَٰتٌ هُنَّ أُمُّ ٱلْكِتَٰبِ وَأُخَرُ مُتَشَٰبِهَٰتٌ ۖ فَأَمَّا ٱلَّذِينَ فِى قُلُوبِهِمْ زَيْغٌ فَيَتَّبِعُونَ مَا تَشَٰبَهَ مِنْهُ ٱبْتِغَآءَ ٱلْفِتْنَةِ وَٱبْتِغَآءَ تَأْوِيلِهِۦ ۗ وَمَا يَعْلَمُ تَأْوِيلَهُۥٓ إِلَّا ٱللَّهُ ۘ وَٱلرَّٰسِخُونَ فِى ٱلْعِلْمِ يَقُولُونَ ءَامَنَّا بِهِۦ كُلٌّ مِّنْ عِندِ رَبِّنَا ۗ وَمَا يَذَّكَّرُ إِلَّآ أُو۟لُوا۟ ٱلْأَلْبَٰبِ ﴿٧﴾

7. Alle waa kan kugu soo dejiyey kitaabka, waxaana ka mid ah aayado sugan (macnahoodu cad yahay) oo ah hooyada quraanka (asalkiisa) iyo kuwa kale oo isu eg, kuwa qalbigoodu leexasho ku jirto waxay raacraacaan kan is shabbaha (isu eg) doonid fidmo (xumaan) iyo doonid ta'wiil (leexin fasir) darteed, ma jiro wax og (dhabta fasirka kaas, iyo waxa uu ku danbayn) Alle mooyee. Kuwa ku xididdaystay cilmiga waxa ay dhihi: waan rumeynay kaas, dhammaanna wuxuu ka ahaaday Alleheen agtiisa, mana waantoobo kuwa caqliga leh mooyee.

رَبَّنَا لَا تُزِغْ قُلُوبَنَا بَعْدَ إِذْ هَدَيْتَنَا وَهَبْ لَنَا مِن لَّدُنكَ رَحْمَةً ۚ إِنَّكَ أَنتَ ٱلْوَهَّابُ ﴿٨﴾

8. Allow ha iilin quluubtannada intaad hanuunisay ka dib, nagana sii agtaada naxariis, adiga unbaa bixin badane ehe.

رَبَّنَآ إِنَّكَ جَامِعُ ٱلنَّاسِ لِيَوْمٍ لَّا رَيْبَ فِيهِ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُخْلِفُ ٱلْمِيعَادَ ﴿٩﴾

9. Allow adaa u kulmin dadka maalin darteed (qiyaamada) oon shaki lahayn, Allana ma baajiyo ballanka.

Alle ayaa quraanka soo dejiyey, isagoo midna macnihiisu cad yahay, midna is shabboho "caddayn" oo u baahan garashadiisu cilmi dheeraadah, mana habboona in quraanka loo leexiyo si aan habbooneyn xaqna ahayn, si loo fidmeeyo loona dhumiyo dadka, waase in dhammaan la rumeeyo quraanka, Allana la weydiisto ku sugnaanta xaqa iyo inuusan leexinnin quluubta, illeen isagaa wax bixiyee, dadkana kulmiya qiyaamada, yaboohana baajineyn. Rasuuulka (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: haddaad aragtaan kuwo ku murmi quraanka waa kuwa Alle magacaabay ee ka digtoonaada (Bukhaari iyo Muslim ayaa weriyay). Wax badan wuxuu ku ducaysan jiray Nabigu: Allaha gaddiya qulubtow ku sug qalbigeyga diintaada... Waxaa wariyey imaam Axmed, Tirmidi iyo Ibnu Mardaweyhi. **[Aali-Cimraan, 7-9]**

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لَن تُغۡنِيَ عَنۡهُمۡ أَمۡوَٰلُهُمۡ وَلَآ أَوۡلَٰدُهُم مِّنَ ٱللَّهِ شَيۡـٔٗاۖ وَأُوْلَٰٓئِكَ هُمۡ وَقُودُ ٱلنَّارِ ١٠

10. Kuwa gaaloobay ugama taraan xoolahoodu iyo caruurtoodu Alle xaggiisa waxba, kuwaasina iyaga umbaa ah shidaalka naarta.

كَدَأۡبِ ءَالِ فِرۡعَوۡنَ وَٱلَّذِينَ مِن قَبۡلِهِمۡۚ كَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِنَا فَأَخَذَهُمُ ٱللَّهُ بِذُنُوبِهِمۡۗ وَٱللَّهُ شَدِيدُ ٱلۡعِقَابِ ١١

11. Waa sidii caadadii Fircoon iyo ehelkiisii iyo kuwii ka horreeyey, waxay beeniyeen aayaadkannagii, markaasuu qabtay Alle dambigooda dartiis, Allana waa daran tahay ciqaabtiisu.

قُل لِّلَّذِينَ كَفَرُواْ سَتُغۡلَبُونَ وَتُحۡشَرُونَ إِلَىٰ جَهَنَّمَۖ وَبِئۡسَ ٱلۡمِهَادُ ١٢

12. Waxaad u dhahdaa kuwii gaaloobay waa laydinka adkaan, waxaana laydiin soo kulmin jahannamo iyadaana u xun gogol.

قَدۡ كَانَ لَكُمۡ ءَايَةٞ فِي فِئَتَيۡنِ ٱلۡتَقَتَاۖ فِئَةٞ تُقَٰتِلُ فِي سَبِيلِ ٱللَّهِ وَأُخۡرَىٰ كَافِرَةٞ يَرَوۡنَهُم مِّثۡلَيۡهِمۡ رَأۡيَ ٱلۡعَيۡنِۚ وَٱللَّهُ يُؤَيِّدُ بِنَصۡرِهِۦ مَن يَشَآءُۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَعِبۡرَةٗ لِّأُوْلِي ٱلۡأَبۡصَٰرِ ١٣

13. Waxaa idiinku sugan aayad labo kooxood oo kulmay (dagaallamay); kooxu waxay ku dagaallami jidka Alle, tan kalana waa gaal, waxayna ku arkaan mu'miniinta laba jibbaarkood xagga argtida isha, Allana waa ku ayidaa (xoojiyaa) gargaarkiisa cidduu doono, arrintaasna waanaa ugu sugan ciddii arag leh (wax garan).

Xoolo iyo carruur iyo wax kale toona wax ugama taraan Alle agtiisa ciddii ku madax adayga, gaaladana waxay la mid tahay tii Fircoon iyo qoomkiisii iyo kuwii ka horreeyey ee Alle si daran u qabtay, ciddii xoog isbidda iyadoo gaal ah waxaa uun u dambeyn jab iyo halaag iyo galidda jahannamo, ciddii waana qaadanna ha fiiriso dagaalkii badar iyo in Alle u gargaaray mu'miniintii xaqa ku dagaallamaysay. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) habeen ayuu istaagay maka, wuxuuna yidhi: "Allow ma gaadhsiiyey" saddex jeer markaasuu Cumar yidhi: haa waadna dadaashay ood isdhibtay ood naseexaysay, ee samir, markaasuu yidhi Nabigu: waxaa sarrayn iimaanka ilaa gaalnimadu ku noqoto waddankeedii, waxayna la dhunban rag badda islaamka. **[Aali-Cimraan, 10-13]**

زُيِّنَ لِلنَّاسِ حُبُّ ٱلشَّهَوَٰتِ مِنَ ٱلنِّسَآءِ وَٱلْبَنِينَ وَٱلْقَنَٰطِيرِ ٱلْمُقَنطَرَةِ مِنَ ٱلذَّهَبِ وَٱلْفِضَّةِ وَٱلْخَيْلِ ٱلْمُسَوَّمَةِ وَٱلْأَنْعَٰمِ وَٱلْحَرْثِ ۗ ذَٰلِكَ مَتَٰعُ ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا ۖ وَٱللَّهُ عِندَهُۥ حُسْنُ ٱلْمَـَٔابِ ﴿١٤﴾

14. Waxaa loo qurxiyey dadka jacaylka waxa naftu doonto oo ah haween, wiilal iyo wax badan oo laban laaban oo dahab iyo qalin ah, iyo fardo laylyan oo darban, iyo ancaamta (xoolaha nool) iyo beeraha, arrintaasna waa raaxada nolosha adduun, Alle agtiisaana noqosho wanaagsan leh.

* قُلْ أَؤُنَبِّئُكُم بِخَيْرٍ مِّن ذَٰلِكُمْ ۚ لِلَّذِينَ ٱتَّقَوْا۟ عِندَ رَبِّهِمْ جَنَّٰتٌ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَا وَأَزْوَٰجٌ مُّطَهَّرَةٌ وَرِضْوَٰنٌ مِّنَ ٱللَّهِ ۗ وَٱللَّهُ بَصِيرٌۢ بِٱلْعِبَادِ ﴿١٥﴾

15. Maydiin ka warramaa wax ka khayr roon kiinnaas, kuwa dhawrsada waxaa ugu sugnaaday Rabbigood agtiisa jannooyin ay dareeri dhexdeeda wabiyaal iyagoo ku waari dhexdeeda iyo haween la daahiriyey iyo raalli ahaansho Alle, Alle na waa arkaa addoomada.

ٱلَّذِينَ يَقُولُونَ رَبَّنَآ إِنَّنَآ ءَامَنَّا فَٱغْفِرْ لَنَا ذُنُوبَنَا وَقِنَا عَذَابَ ٱلنَّارِ ﴿١٦﴾

16. Ee ah kuwa dhihi Rabbiyow annagu waan rumeynay ee noo dhaaf dambiyadannada, nagana dhawr cadaabka naarta.

ٱلصَّٰبِرِينَ وَٱلصَّٰدِقِينَ وَٱلْقَٰنِتِينَ وَٱلْمُنفِقِينَ وَٱلْمُسْتَغْفِرِينَ بِٱلْأَسْحَارِ ﴿١٧﴾

17. Ee ah kuwa samra ee runloowga ah, ee adeeca Alle, ee wax bixiya, ee dambi dhaaf warsada aroortii.

Dabeecadda dadka waxaa ka mid ah inuu jeclaado nolosha adduunka iyo waxa laysku qurxiyo oo xoolo, ehel, iyo lacagba ah, Alle agtiisaase wanaag, jannooyin, ehel nadiif ah iyo rilaha Alle jiraan, waxaana mudan arrimahaas kuwa Alle dambi dhaafka warsada ee ka magan gala naarta, ee ku sifooba samir, runsheeg, daacad, wax bixin iyo toobad keen. Ibraahim binu Xaadhib wuxuu ka wariyey aabbihiis inuu yidhi: waxaan maqlay ruux aroortii ku leh dhinaca masjidka: Allow waad i amartay waana ku adeecay, waqtiguna waa aroor ee ii dhaaf (dambiga) markaasaan dayay illeen waa Ibnu Mascuud, Alle ha ka raalli noqdee. **[Aali-Cimraan, 14-17]**

شَهِدَ ٱللَّهُ أَنَّهُۥ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ
وَٱلْمَلَٰٓئِكَةُ وَأُو۟لُوا۟ ٱلْعِلْمِ قَآئِمًۢا بِٱلْقِسْطِ ۚ
لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿١٨﴾

18. Alle wuxuu qirayaa inaan ku xaq lugu caabudaa jirin isaga mooyee, malaa'igtuna (way qiri) iyo kuwa cilmiga leh, maamulana caddaalad, ku xaq lugu caabudaa ma jiro isaga mooyee, waana adkaade falsan.

إِنَّ ٱلدِّينَ عِندَ ٱللَّهِ ٱلْإِسْلَٰمُ ۗ وَمَا
ٱخْتَلَفَ ٱلَّذِينَ أُو۟تُوا۟ ٱلْكِتَٰبَ إِلَّا مِنۢ
بَعْدِ مَا جَآءَهُمُ ٱلْعِلْمُ بَغْيًۢا بَيْنَهُمْ ۗ وَمَن
يَكْفُرْ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ فَإِنَّ ٱللَّهَ سَرِيعُ
ٱلْحِسَابِ ﴿١٩﴾

19. Diintuna (xaqa ah) Alle agtiisa waa islaamka, ismana khilaafin kuwii la siiyey kitaabka intuu u yimid cilmi mooyee, xasad (dulmi) dhexdooda ah dartiis, ruuxii ka gaalooba aayaadka Alle, ilaahay waa deg deg badan tahay xisaabiddiisu (wuu ciqaabi).

فَإِنْ حَآجُّوكَ فَقُلْ أَسْلَمْتُ وَجْهِىَ
لِلَّهِ وَمَنِ ٱتَّبَعَنِ ۗ وَقُل لِّلَّذِينَ أُو۟تُوا۟
ٱلْكِتَٰبَ وَٱلْأُمِّيِّـۧنَ ءَأَسْلَمْتُمْ ۚ فَإِنْ
أَسْلَمُوا۟ فَقَدِ ٱهْتَدَوا۟ ۖ وَّإِن تَوَلَّوْا۟ فَإِنَّمَا
عَلَيْكَ ٱلْبَلَٰغُ ۗ وَٱللَّهُ بَصِيرٌۢ بِٱلْعِبَادِ ﴿٢٠﴾

20. Hadday kula xujaytamaan (murmaan) waxaad dhahdaa waxaan u hoggaamiyey wajigayga Alle (ani) iyo inta i raacday, waxaad ku dhahdaa kuwa la siiyey kitaabka (ehelu kitaabka) iyo ummiyiinta (wax aqoon): ma hoggaansamaysaan (hoggaansama)? Hadday hoggaansamaanna way hanuuneen, hadday jeedsadaanna waxaa uun ku saaran gaadhsiin, Allana waa arkaa addoommada.

Kalinnimada Alle iyo xaqnimadiisa waxaa qiray Alle, malaa'igta, kuwa cilmiga leh, diinta dhabta ah ee xaqa ahna waa diinta islaamka, waxa ka soo hadhay waa wax kama jiraan, gaaladuna waxay xaqa u diideen kibir iyo xasad, Allaana ku ciqaabi, muran iyo doodna looma baahna ee waa in Alle loo hoggaansamo, dadkoo dhanna waa inay islaamaan, ciddii diidana xil kama saarra Nabiga, wuxuuna yidhi Nabigu (ammaan iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): Nabiyada waxaa loo bixiyey qoomkooda anigase waxaa la ii bixiyey dadka dhammaantiis. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim. Waxayna ku tusin aayaddu in Alle Rasuulka u diray dadkoo dhan, oo ciddaan rumeynin dhuntay, tahayna ehelka naarta. **[Aali-Cimraan, 18-20]**

إِنَّ ٱلَّذِينَ يَكۡفُرُونَ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ وَيَقۡتُلُونَ ٱلنَّبِيِّـۧنَ بِغَيۡرِ حَقّٖ وَيَقۡتُلُونَ ٱلَّذِينَ يَأۡمُرُونَ بِٱلۡقِسۡطِ مِنَ ٱلنَّاسِ فَبَشِّرۡهُم بِعَذَابٍ أَلِيمٍ ﴿٢١﴾

21. Kuwa ka gaaloobi aayaadka Alle oo u dila Nabiyada xaq darro, oo dila kuwa fara caddaaladda oo dadka ka mid ah ugu bishaaree cadaab daran.

أُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ حَبِطَتۡ أَعۡمَٰلُهُمۡ فِي ٱلدُّنۡيَا وَٱلۡأٓخِرَةِ وَمَا لَهُم مِّن نَّٰصِرِينَ ﴿٢٢﴾

22. Kuwaasi waa kuwuu buray (hoobtay) camalkoodu adduun iyo aakhiraba, mana u sugnaan wax u gargaara.

أَلَمۡ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ أُوتُواْ نَصِيبٗا مِّنَ ٱلۡكِتَٰبِ يُدۡعَوۡنَ إِلَىٰ كِتَٰبِ ٱللَّهِ لِيَحۡكُمَ بَيۡنَهُمۡ ثُمَّ يَتَوَلَّىٰ فَرِيقٞ مِّنۡهُمۡ وَهُم مُّعۡرِضُونَ ﴿٢٣﴾

23. Ma aragtay (ka warran) kuwii la siiyey qayb ka mid ah kitaabka oo loogu yeedhi kitaabka Alle inuu kala xukumo dhexdooda markaas ay jeedsan koox ka mid ah iyagoo diiddan (xaqa).

ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمۡ قَالُواْ لَن تَمَسَّنَا ٱلنَّارُ إِلَّآ أَيَّامٗا مَّعۡدُودَٰتٖۖ وَغَرَّهُمۡ فِي دِينِهِم مَّا كَانُواْ يَفۡتَرُونَ ﴿٢٤﴾

24. Waxaana ugu wacan inay dheheen ma na taabato naaru maalmo mooyee, waxaa ku dhagray diintooda waxay been abuuran jireen.

فَكَيۡفَ إِذَا جَمَعۡنَٰهُمۡ لِيَوۡمٖ لَّا رَيۡبَ فِيهِ وَوُفِّيَتۡ كُلُّ نَفۡسٖ مَّا كَسَبَتۡ وَهُمۡ لَا يُظۡلَمُونَ ﴿٢٥﴾

25. Ee say ahaan markaannu u kulminno maalin aan shaki lahayn, loona oofiyo (dhammeeyo) naf kastaa waxay kasbatay iyagoon la dulmayn.

Kawii gaaloobay ee diiday aayaadka Alle oo layn jiray Nabiyada iyo kuwa xaqa fara dadka, si xaq darro ahna u wax yeelleeyey, waxay mudan cadaab daran, camalkooduna wuu buri adduun iyo aakhiraba, wax u gargaarana ma helaan. Abuu cubayda binul Jarraax waxaa laga wariyey inuu yidhi: waxaan idhi: Rasuulka Allow yaa dadka ugu cadaab daran maalinta qiyaamo? Wuxuuna yidhi Nabigu: ruux dilay Nabi ama dilay ruux fari wanaag, reebina xumaanta... Waxaa wariyey Ibnu abii Xaatim iyo Ibnu Jariir.

Yuhuud iyo nasaara waxaa la kala siiyey tawreed iyo injiil, waxaana loogu yeedhay inay rumeeyaan kitaabka quraanka ah ee xaqa ah, iskuna xukumaan, weyse diideen iyagoo qaarkood sheegay inaan la cadaabayn wax maalmo ah oo tirsan mooyee, taasina waxaa ugu wacan dhagar iyo been abuurashada ay ku samayn diinta, waxaase la abaal marin qiyaamada oon cidna la dulmiyeyn. **[Aali-Cimraan, 21-25]**

قُلِ ٱللَّهُمَّ مَٰلِكَ ٱلْمُلْكِ تُؤْتِى ٱلْمُلْكَ مَن تَشَآءُ وَتَنزِعُ ٱلْمُلْكَ مِمَّن تَشَآءُ وَتُعِزُّ مَن تَشَآءُ وَتُذِلُّ مَن تَشَآءُ ۖ بِيَدِكَ ٱلْخَيْرُ ۖ إِنَّكَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿٢٦﴾

26. Waxaad dhahdaa allow adaa hanta xukunka, waxaad siisaa xukunka ciddaad doonto, waxaad ka siibtaa "wareejisaa" xukunka ciddaad doonto, waxaadna cisaysaa ciddaad doonto, waxaadna dullaysaa ciddaad doonto, adaana hanta khayrka, adaana wax kasta kara.

تُولِجُ ٱلَّيْلَ فِى ٱلنَّهَارِ وَتُولِجُ ٱلنَّهَارَ فِى ٱلَّيْلِ ۖ وَتُخْرِجُ ٱلْحَىَّ مِنَ ٱلْمَيِّتِ وَتُخْرِجُ ٱلْمَيِّتَ مِنَ ٱلْحَىِّ ۖ وَتَرْزُقُ مَن تَشَآءُ بِغَيْرِ حِسَابٍ ﴿٢٧﴾

27. Waxaadna dhex galisaa habeenka maalinta, dhex gelisaa maalinta habeenka, kana soo bixisaa wax nool wax dhimaad ah kana soo bixisaa wax dhimaad ah wax nool, waadna arzaaqdaa ciddaad doonto xisaab la'aan.

لَّا يَتَّخِذِ ٱلْمُؤْمِنُونَ ٱلْكَٰفِرِينَ أَوْلِيَآءَ مِن دُونِ ٱلْمُؤْمِنِينَ ۖ وَمَن يَفْعَلْ ذَٰلِكَ فَلَيْسَ مِنَ ٱللَّهِ فِى شَىْءٍ إِلَّآ أَن تَتَّقُوا۟ مِنْهُمْ تُقَىٰةً ۗ وَيُحَذِّرُكُمُ ٱللَّهُ نَفْسَهُۥ ۗ وَإِلَى ٱللَّهِ ٱلْمَصِيرُ ﴿٢٨﴾

28. Yeyna ka yeelan mu'miniintu gaalada sokeeye mu'miniinta ka sokow, ruuxii fala saas Alle berri buu ka yahay, inaad dhawrsasho xaggooda ka dhawrsataan mooyee, wuxuuna idiinka digi Alle naftiisa, xagga Allaana loo ahaan.

Waxba kama qarsoona Alle, ama laab ha lagu qariyo ama ha la muujiyo. Ama cir iyo dhul ha ku sugnaadee, waana awoodle, ka abaal marin naf kasta waxay camal fashay khayr iyo sharba, waana naxariis badane ka digi ciqaabtiisa, faray in ciddii jecel Alle ay raacdo Nabiga si Alle u jeclaado uguna dambi dhaafo uguna naxariisto, waana waajib in Alle iyo Rasuulkiisa la addeeco, ciddii ka jeedsatana waa gaaloowday, Allana ma jecla gaalo. Rasuulkuna (ammaan iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: cidda fasha waxaan amarkannaga ahayn waa lagu celin (diidi). Xasanul Basri wuxuu yidhi: Alle naxariistiisa waxaa ka mid ah inuu isaga digo dadka. **[Aali-Cimraan, 29-32]**

قُلْ إِن تُخْفُوا۟ مَا فِى صُدُورِكُمْ أَوْ تُبْدُوهُ يَعْلَمْهُ ٱللَّهُ ۗ وَيَعْلَمُ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِى ٱلْأَرْضِ ۗ وَٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿٢٩﴾

29. Waxaad dhahdaa haddaad qarisaan waxa laabtiinna ku sugan ama aad muujisaan waa ogaan alle, wuxuuna ogaan waxa samooyinka ku sugan iyo dhulka, Allana wax kasta wuu karaa.

يَوْمَ تَجِدُ كُلُّ نَفْسٍ مَّا عَمِلَتْ مِنْ خَيْرٍ مُّحْضَرًا وَمَا عَمِلَتْ مِن سُوٓءٍ تَوَدُّ لَوْ أَنَّ بَيْنَهَا وَبَيْنَهُۥٓ أَمَدًۢا بَعِيدًا ۗ وَيُحَذِّرُكُمُ ٱللَّهُ نَفْسَهُۥ ۗ وَٱللَّهُ رَءُوفٌۢ بِٱلْعِبَادِ ﴿٣٠﴾

30. (Xusuuso) maalinta ay heli nafkasta waxay camal fashay oo khayr ah oo la soo xaadiriyey (la keenay), waxay camal fashay oo xumaan ahna waxay jeclaan in la yeelo iyada iyo isaga dhexdooda muddo dheer, wuxuuna idiinka digi alle naftiisa (ciqaabtiisa), Alle na waa u Naxariistaha Addoomadiisa.

قُلْ إِن كُنتُمْ تُحِبُّونَ ٱللَّهَ فَٱتَّبِعُونِى يُحْبِبْكُمُ ٱللَّهُ وَيَغْفِرْ لَكُمْ ذُنُوبَكُمْ ۚ وَٱللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٣١﴾

31. Waxaad dhahdaa haddaad tihiin kuwo jecel alle i raaca haydin jeclaado allee hana idiin dhaafo dambigiinnee, Allana waa dambi dhaafe naxariista.

قُلْ أَطِيعُوا۟ ٱللَّهَ وَٱلرَّسُولَ ۖ فَإِن تَوَلَّوْا۟ فَإِنَّ ٱللَّهَ لَا يُحِبُّ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٣٢﴾

32. Waxaad dhahdaa adeeca alle iyo rasuulkiisa, haddaad jeedsataan Alle ma jecla gaalada.

Waxba kama qarsoona Alle, ama laab ha lagu qariyo ama ha la muujiyo. Ama cir iyo dhul ha ku sugnaadee, waana awoodle, ka abaal marin naf kasta waxay camal fashay khayr iyo sharba, waana naxariis badane ka digi ciqaabtiisa,

faray in ciddii jecel Alle ay raacdo nabiga si Alle u jeclaado uguna dambi dhaafo uguna naxariisto, waana waajib in Alle iyo Rasuulkiisa la addeeco, ciddii ka jeedsatana waa gaaloowday, Allana ma jecla gaalo. Rasuulkuna (ammaan iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: cidda fasha waxaan amarkannaga ahayn waa lagu celin (diidi). Xasanul Basri wuxuu yidhi: Alle naxariistiisa waxaa ka mid ah inuu isaga digo dadka. **[Aali-Cimraan 29-32].**

33. Alle wuxuu ka doortay aadan, Nuux, ehelkii Ibraahim iyo ehelkii Cimraan caalamka.

34. Waana farac qaarkood qaar ka yimid, Alle na waa maqle oge ah.

35. Xusuuso markay tidhi haweenaydii cimraan: Allow waxaan kuugu nadray waxa uurkayga ku jira inuu xor kuu ahaado (cibaadadaada) ee iga aqbal, adiga umbaa wax maqle oge ehe.

36. Markay dhashay gabadh waxay tidhi: Allow waxaan dhalay dhaddig, Alle na waa og yahay waxay dhashay, labna la mid ma aha dhaddig, waxaanan ku magacaabay maryam, waxaanan kaa magan galin iyada iyo faraceeda shaydaanka la dhagaxyeeyey (la dheereeyey).

* إِنَّ ٱللَّهَ ٱصْطَفَىٰٓ ءَادَمَ وَنُوحًا وَءَالَ إِبْرَٰهِيمَ وَءَالَ عِمْرَٰنَ عَلَى ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٣٣﴾

ذُرِّيَّةًۢ بَعْضُهَا مِنۢ بَعْضٍ ۗ وَٱللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٣٤﴾

إِذْ قَالَتِ ٱمْرَأَتُ عِمْرَٰنَ رَبِّ إِنِّى نَذَرْتُ لَكَ مَا فِى بَطْنِى مُحَرَّرًا فَتَقَبَّلْ مِنِّىٓ ۖ إِنَّكَ أَنتَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْعَلِيمُ ﴿٣٥﴾

فَلَمَّا وَضَعَتْهَا قَالَتْ رَبِّ إِنِّى وَضَعْتُهَآ أُنثَىٰ وَٱللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا وَضَعَتْ وَلَيْسَ ٱلذَّكَرُ كَٱلْأُنثَىٰ ۖ وَإِنِّى سَمَّيْتُهَا مَرْيَمَ وَإِنِّىٓ أُعِيذُهَا بِكَ وَذُرِّيَّتَهَا مِنَ ٱلشَّيْطَٰنِ ٱلرَّجِيمِ ﴿٣٦﴾

Alle sarreeye wuxuu abuuray, oo doortay Aadam, nafna galiyey, malaa'igtana faray inay u sujuuddo, barayna magaca wax kasta, dajiyeyna jannada, kana soo dejiyey xigmad darteed, Nuuxna ka dhigay rasuulkii ugu horreeyey doortayna isaga iyo ehelkii Nabi Ibraahim iyo ehelkii Cimraan. Aayadaha kale waxay sheegi Maryam hooyadeed iyo siday ugu nadartay in waxa uurkeeda ku jira hadduu lab noqdo ka shaqeeyo kaniisadda, markuu noqday gabadhna ay ka magangalisay Alle shaydaanka iyada iyo waxay dhasho, Rasuulkuna wuxuu yidhi (ammaan iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): cid kastoo la dhalo shaydaan baa taabta Ciise ibnu Maryam mooyee, markaasuu akhriyey Nabigu aayadda (ammaan iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee). **[Aali-Cimraan, 33-36]**

37. Wuxuuna ka aqbalay Alle aqbal fiican, wuuna koriyey korin fiican (xannaano), waxaana kafaala qaaday (dhaqaaleeyey) zakariye, markasta oo uu ugu galo mixraabkana (qolka) wuxuu ka helaa agteeda rizqi, wuxuuna dhahaa: xaggee kaaga yimid Maryamey kan, waxayna dhahdaa: wuxuu ka yimid Alle agtiisa, Alle na wuu u arzuqaa cidduu doono xisaab la'aan.

فَتَقَبَّلَهَا رَبُّهَا بِقَبُولٍ حَسَنٍ وَأَنۢبَتَهَا نَبَاتًا حَسَنًا وَكَفَّلَهَا زَكَرِيَّا ۖ كُلَّمَا دَخَلَ عَلَيۡهَا زَكَرِيَّا ٱلۡمِحۡرَابَ وَجَدَ عِندَهَا رِزۡقًا ۖ قَالَ يَٰمَرۡيَمُ أَنَّىٰ لَكِ هَٰذَا ۖ قَالَتۡ هُوَ مِنۡ عِندِ ٱللَّهِ ۖ إِنَّ ٱللَّهَ يَرۡزُقُ مَن يَشَآءُ بِغَيۡرِ حِسَابٍ ﴿٣٧﴾

38. Halkaasuu baryey Zakariye Rabbigiis, yidhina Rabbiyow iga sii agtaada farac wanaagsan adaa maqle (ajiibe) ducada ahe.

هُنَالِكَ دَعَا زَكَرِيَّا رَبَّهُۥ ۖ قَالَ رَبِّ هَبۡ لِي مِن لَّدُنكَ ذُرِّيَّةً طَيِّبَةً ۖ إِنَّكَ سَمِيعُ ٱلدُّعَآءِ ﴿٣٨﴾

39. Waxaana u dhawaaqday malaa'igtii isagoo taagan oo ku tukan mixaraabka: Alle wuxuu kuugu bishaarayn Yaxye isagoo rumeyn kalimadda Alle (Ciise), sayidna ah haween u tegiddood iska ilaaliyey, Nabina ah, ka mid ah kuwa waanagsan.

فَنَادَتۡهُ ٱلۡمَلَٰٓئِكَةُ وَهُوَ قَآئِمٌ يُصَلِّي فِي ٱلۡمِحۡرَابِ أَنَّ ٱللَّهَ يُبَشِّرُكَ بِيَحۡيَىٰ مُصَدِّقَۢا بِكَلِمَةٖ مِّنَ ٱللَّهِ وَسَيِّدٗا وَحَصُورٗا وَنَبِيّٗا مِّنَ ٱلصَّٰلِحِينَ ﴿٣٩﴾

40. Wuxuu yidhi Rabbiyow sidee iigu ahaan wiil anooy isoo gaadhay duqnimo, haweeneydeyduna madhalays tahay, wuxuu yidhi: saasuu u falaa Alle wuxuu doono.

قَالَ رَبِّ أَنَّىٰ يَكُونُ لِي غُلَٰمٞ وَقَدۡ بَلَغَنِيَ ٱلۡكِبَرُ وَٱمۡرَأَتِي عَاقِرٞ ۖ قَالَ كَذَٰلِكَ ٱللَّهُ يَفۡعَلُ مَا يَشَآءُ ﴿٤٠﴾

41. Wuxuu yidhi Rabbiyow ii yeel calaamo wuxuuna yidhi calaamaddu waa inaadan la hadlin dadka saddex maalmood

قَالَ رَبِّ ٱجۡعَل لِّيٓ ءَايَةٗ ۚ قَالَ ءَايَتُكَ أَلَّا تُكَلِّمَ ٱلنَّاسَ ثَلَٰثَةَ أَيَّامٍ إِلَّا رَمۡزٗا ۗ

ishaaro mooyee, xusna Allehaa wax badan, una tasbiixso galabtii iyo aroortiiba.

وَٱذْكُر رَّبَّكَ كَثِيرًا وَسَبِّحْ بِٱلْعَشِيِّ وَٱلْإِبْكَٰرِ ﴿٤١﴾

Waxay caddayn aayaduhu sida Alle Maryam u dhaqaaleeyey una arzaaqay, Nabi Zakariyana u xannaaneeyey, markuu wax layaab leh ku arkeyna baryay Alle inuu ilmo siiyo looguna bishaareeyey Yaxye, inkastoo uu wayn yahay, haweeneyduna ayan dhalin, hasa yeeshee Alle wuu sameeyaa wuxuu doono, waxaana la faray inuusan saddex maalmood dadka la hadlin ee cibaadaysto, taasoo calaamo u ah aqbal iyo siinta wiilka. **[Aali-Cimraan, 37-41]**

42. (Xusuuso) markay tidhi malaa'igtu: maryamoy Alle waa ku doortay waana ku daahir yeelay wuxuuna kaa doortay haweenka caalamka.

وَإِذْ قَالَتِ ٱلْمَلَٰٓئِكَةُ يَٰمَرْيَمُ إِنَّ ٱللَّهَ ٱصْطَفَىٰكِ وَطَهَّرَكِ وَٱصْطَفَىٰكِ عَلَىٰ نِسَآءِ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٤٢﴾

43. Maryamooy adeec (u khushuuc) Allehaa, sujuudna, lana rukuuc (la tuko) kuwa rukuuca (tukada).

يَٰمَرْيَمُ ٱقْنُتِى لِرَبِّكِ وَٱسْجُدِى وَٱرْكَعِى مَعَ ٱلرَّٰكِعِينَ ﴿٤٣﴾

44. Taasi waa warka waxa maqan. Oonnu kuu waxyoon, mana aadan la joogin markey tuurayeen qalimmadooda koodii kafaala qaadi maryam, mana aadan la joogin markey murmayeen.

ذَٰلِكَ مِنْ أَنۢبَآءِ ٱلْغَيْبِ نُوحِيهِ إِلَيْكَ ۚ وَمَا كُنتَ لَدَيْهِمْ إِذْ يُلْقُونَ أَقْلَٰمَهُمْ أَيُّهُمْ يَكْفُلُ مَرْيَمَ وَمَا كُنتَ لَدَيْهِمْ إِذْ يَخْتَصِمُونَ ﴿٤٤﴾

45. (Xusuuso) markey tidhi malaa'igtu Maryamooy Alle wuxuu kuugu bishaarayn kalimo xaggiisa ah (wiil) magaciisu yahay Masiix Ciise ibnu Maryam isagoo sharaf leh adduun iyo aakhiraba, kana mid ah kuwa la soo dhaweeyey.

إِذْ قَالَتِ ٱلْمَلَٰٓئِكَةُ يَٰمَرْيَمُ إِنَّ ٱللَّهَ يُبَشِّرُكِ بِكَلِمَةٍ مِّنْهُ ٱسْمُهُ ٱلْمَسِيحُ عِيسَى ٱبْنُ مَرْيَمَ وَجِيهًا فِى ٱلدُّنْيَا وَٱلْءَاخِرَةِ وَمِنَ ٱلْمُقَرَّبِينَ ﴿٤٥﴾

46. Kulana hadli dadka dharabta iyo isagoo (gadhmadoobe) nin wayn ah, kana mid ah kuwa suubban.

وَيُكَلِّمُ ٱلنَّاسَ فِى ٱلْمَهْدِ وَكَهْلًا وَمِنَ ٱلصَّٰلِحِينَ ﴿٤٦﴾

Aayaduhu waxay ka warrami waxay malaa'igtu kula hadashay Maryam iyadoo fulin amarka Alle, iyo sida Alle u doortay una dhahiray, una faray inay cibaadada badiso, saasuuna Alle ugaga warramay inkastoosan joogin Nabiga goobtaas, waxaa kalooy ka warrami sida Alle ugu bishaareeyey Nabi Ciise oo ah mid sharaf leh aakhiro iyo adduunba, Alle na dhaweeyey, isagoo dadka kula hadlay yaraan iyo wayniba, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: waxaa u khayr badan haweenka caalamka afar: Maryama bintu Cimraan, Aasiya haweeneydii Fircoon, Khadiija bintu Khuweylid iyo Faadumo binti Rasuulka Alle. Waxaa wariyey Ibn Mardaweyhi. **[Aali-Cimraan, 42-46]**

قَالَتْ رَبِّ أَنَّىٰ يَكُونُ لِي وَلَدٌ وَلَمْ يَمْسَسْنِي بَشَرٌ ۖ قَالَ كَذَٰلِكِ ٱللَّهُ يَخْلُقُ مَا يَشَآءُ ۚ إِذَا قَضَىٰٓ أَمْرًا فَإِنَّمَا يَقُولُ لَهُۥ كُن فَيَكُونُ ﴿٤٧﴾

47. Waxay tidhi (Maryam): Allow sidee ilmo iigu ahaan isagoon i taaban dad (nin), wuxuu yidhi (Alle): saasuu Alle u abuuraa wuxuu doono, markuu xukmin amarna wuxuu uun u dhahaa ahow wuuna ahaadaa.

وَيُعَلِّمُهُ ٱلْكِتَٰبَ وَٱلْحِكْمَةَ وَٱلتَّوْرَىٰةَ وَٱلْإِنجِيلَ ﴿٤٨﴾

48. Wuxuuna (Alle) bari Ciise kitaabka, xigmad, towreed iyo injiil.

وَرَسُولًا إِلَىٰ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ أَنِّى قَدْ جِئْتُكُم بِـَٔايَةٍ مِّن رَّبِّكُمْ أَنِّىٓ أَخْلُقُ لَكُم مِّنَ ٱلطِّينِ كَهَيْـَٔةِ ٱلطَّيْرِ فَأَنفُخُ فِيهِ فَيَكُونُ طَيْرًۢا بِإِذْنِ ٱللَّهِ ۖ وَأُبْرِئُ ٱلْأَكْمَهَ وَٱلْأَبْرَصَ وَأُحْىِ ٱلْمَوْتَىٰ بِإِذْنِ ٱللَّهِ ۖ وَأُنَبِّئُكُم بِمَا تَأْكُلُونَ وَمَا تَدَّخِرُونَ فِى بُيُوتِكُمْ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَـَٔايَةً لَّكُمْ إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ﴿٤٩﴾

49. Waxaan ka dhigaynaa ku loo diray banii'israa'iil, (isagoo) u dhihi waxaan idiin la imid aayad xagga Allihiin ka ahaatay, waxaana idiinka abuuri dhoobada shimbira oo kale, oo afuufi ooy noqon shimbir idamka Alle, waxaana bogsiiyaa indhala'aan ku dhashe, baraslaha, waxaana nooleeyaa maydka idamka Alle, waxaana idiin ka warrami waxaad cunaysaan iyo waxaad ku kaydsanaysaan guryihiinna, taasina waxay idiin tahay calaamad haddaad rumeynaysaan (xaqa).

وَمُصَدِّقًا لِّمَا بَيْنَ يَدَيَّ مِنَ ٱلتَّوْرَىٰةِ وَلِأُحِلَّ لَكُم بَعْضَ ٱلَّذِى حُرِّمَ عَلَيْكُمْ ۚ وَجِئْتُكُم بِـَٔايَةٍ مِّن رَّبِّكُمْ فَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَأَطِيعُونِ ﴿٥٠﴾

50. Waxaana rumeyn wixii iga horreeyey oo tawreed ah, waxaan idiin bannayn wixii laydinka reebay qaarkiis, waxaana idiin la imid calaamad xagga Allihiin ka ahaatay, ee ka dhawrsada Alle, ina adeeca.

إِنَّ ٱللَّهَ رَبِّى وَرَبُّكُمْ فَٱعْبُدُوهُ ۗ هَٰذَا صِرَٰطٌ مُّسْتَقِيمٌ ﴿٥١﴾

51. Ilaah waa Rabbigay iyo Rabbigiin ee caabuda, taasaana ah jidka toosane.

Aayadahan waxay ka warrami Maryam iyo wiilkeedii Ciise iyo sida Alle u siiyey iyadoon dad taaban, una baray kutubta, ugana yeelay rasuul banii'israa'iil, idamka Allana wax ku bogsiin jiray, kuna nooleyn jiray, kagana warrami jiray waxay cuni iyo waxay kaydsan, dhammaan waxaasina waa wax Alle idankiisa ku ahaaday, ee Ciise waa uun addoon Alle, tan kale wuxuu raacay xaqii ka horreeyey wuxuuna u banneeyey waxyaalihii laga reebay qaarkood, wuxuuna u sheegay Allihiis iyo Allahoodba in ilaahay yahay, oyna waajib tahay in Allaha xaqa ah la caabudo, saasaana ah jidka Alle ee toosan. **[Aali-Cimraan, 47-51]**

* فَلَمَّآ أَحَسَّ عِيسَىٰ مِنْهُمُ ٱلْكُفْرَ قَالَ مَنْ أَنصَارِىٓ إِلَى ٱللَّهِ ۖ قَالَ ٱلْحَوَارِيُّونَ نَحْنُ أَنصَارُ ٱللَّهِ ءَامَنَّا بِٱللَّهِ وَٱشْهَدْ بِأَنَّا مُسْلِمُونَ ﴿٥٢﴾

52. Markuu ka kasay Ciise xaggooda gaalnimo yuu yidhi: yaa iigu gargaari Alle, waxayna dhaheen xawaariyiintii (gargaarayaashii) annagaa ah gargaarayaasha Alle (diintiisa) waxaan rumeynay Alle ee marag ka noqo inaan muslimiin nahay.

رَبَّنَآ ءَامَنَّا بِمَآ أَنزَلْتَ وَٱتَّبَعْنَا ٱلرَّسُولَ فَٱكْتُبْنَا مَعَ ٱلشَّٰهِدِينَ ﴿٥٣﴾

53. Allow waan rumeynay waxaad soo dejisay waxaanna raacnay Rasuulka ee nagu qor (naga dhig) la jirka markhaatiyada, (ummadda Nabi Muxamad).

وَمَكَرُوا۟ وَمَكَرَ ٱللَّهُ ۖ وَٱللَّهُ خَيْرُ ٱلْمَٰكِرِينَ ﴿٥٤﴾

54. Way dhakreen Nabi Ciise, Allana ayaguu dhakray, Allaana u wanaagsan wax dhakra.

إِذْ قَالَ ٱللَّهُ يَٰعِيسَىٰٓ إِنِّى مُتَوَفِّيكَ
وَرَافِعُكَ إِلَىَّ وَمُطَهِّرُكَ مِنَ ٱلَّذِينَ
كَفَرُوا۟ وَجَاعِلُ ٱلَّذِينَ ٱتَّبَعُوكَ فَوْقَ
ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓا۟ إِلَىٰ يَوْمِ ٱلْقِيَٰمَةِ ۖ ثُمَّ إِلَىَّ
مَرْجِعُكُمْ فَأَحْكُمُ بَيْنَكُمْ فِيمَا
كُنتُمْ فِيهِ تَخْتَلِفُونَ ﴿٥٥﴾

55. Xusuuso markuu ku yidhi Alle: Ciisow waan ku oofsan, waana ku koryeeli, waana kaa daahirin kuwii gaaloobay, waxaana yeeli kuwa ku raaca korka kuwa gaaloobay tan iyo qiyaamada, markaasna xaggaygaa laydiin soo celin, waana idin kala xukumi dhexdiinna waxaad isku khilaafsanaydeen.

Markuu diray Alle Nabi Ciise waxay kala hor yimaadeen yuhuud iyo wixii raacay gaalnimo, waxaase raacay gargaarayaashii (xawaariyiintii) oo xaqa raacay, muslimiinna noqday, Alle na warsaday inuu marag ka yeelo mar hadday rumeeyeen xaqa raaceenna rasuulka, kuwii kale dhagar bay faleen, Allana iyaguu dhakray (dhagarta daalimiinta mudan ku dhacdaahi waa tilmaan wanaagsan), Ciisana oofsaday, daahirna ka yeelay, kuwa muslimka ah ee xaqa dhabta ah raacana ka yeeli korka kuwa gaalooba tan iyo qiyaamada, markay u noqdaanna kala xukmin, xaalka Nabi Ciisena waa in loo rumeeyo sida Alle uga warramay iyo Rasuulku, waana addoon Alle oon mudan in awood tan dadka ka baxsan ama ilaahnimo lagu sheego, taasina waa doqonnimo iyo jaahilnimo daran, maxaa ka fiican in la dhaho waa addoon Alle doortay oo Nabi ah, mana dhaafsiisna Nabinnimo iyo rasuulnimo.Wakaas xaqu. **[Aali-Cimraan, 52-55]**

فَأَمَّا ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ فَأُعَذِّبُهُمْ عَذَابًا
شَدِيدًا فِى ٱلدُّنْيَا وَٱلْءَاخِرَةِ وَمَا لَهُم مِّن
نَّٰصِرِينَ ﴿٥٦﴾

56. Kuwa gaaloobase waxaan cadaabi cadaab daran adduun iyo aakhiraba, mana helaan gargaare.

وَأَمَّا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ
فَيُوَفِّيهِمْ أُجُورَهُمْ ۗ وَٱللَّهُ لَا يُحِبُّ
ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٥٧﴾

57. Kuwa (xaqa) rumeeyeyse oo camal fiican falay wuxuu u oofin (dhammayn Alle) ajirkooda, Alle na ma jecla daalimiinta.

ذَٰلِكَ نَتْلُوهُ عَلَيْكَ مِنَ ٱلْءَايَٰتِ وَٱلذِّكْرِ
ٱلْحَكِيمِ ﴿٥٨﴾

58. Kaasaan ku akhriyeynaa korkaaga oo aayaad ah iyo xus (quraan) xigmo leh.

إِنَّ مَثَلَ عِيسَىٰ عِندَ ٱللَّهِ كَمَثَلِ ءَادَمَ ۖ
خَلَقَهُۥ مِن تُرَابٍ ثُمَّ قَالَ لَهُۥ كُن
فَيَكُونُ ﴿٥٩﴾

59. Tusaalaha Ciise Alle agtiisa waa sida (Nabi) Aadam, Alle ayaa ka abuuray carro markaasuu ku yidhi ahow wuuna ahaaday.

ٱلۡحَقُّ مِن رَّبِّكَ فَلَا تَكُن مِّنَ ٱلۡمُمۡتَرِينَ ﴿٦٠﴾

60. Xaqu Allehaa buu ka ahaaday ee ha noqonnin kuwa shakiya.

فَمَنۡ حَآجَّكَ فِيهِ مِنۢ بَعۡدِ مَا جَآءَكَ مِنَ ٱلۡعِلۡمِ فَقُلۡ تَعَالَوۡاْ نَدۡعُ أَبۡنَآءَنَا وَأَبۡنَآءَكُمۡ وَنِسَآءَنَا وَنِسَآءَكُمۡ وَأَنفُسَنَا وَأَنفُسَكُمۡ ثُمَّ نَبۡتَهِلۡ فَنَجۡعَل لَّعۡنَتَ ٱللَّهِ عَلَى ٱلۡكَٰذِبِينَ ﴿٦١﴾

61. Ee ruuxii kugula dooda intuu kuu yimid cilmi ka dib waxaad dhahdaa kaalaya aan u yeedhno caruurtannada iyo caruurtiinna iyo haweenkannaga iyo haweenkiinna iyo naftannada iyo naftiinna markaas aan baryootanno oon lacanadda Alle kor yeello beenaalayaasha.

Waxaa ka mid ah usluubka quraanka inuu isla sheego had iyo jeer kuwa wanaagsan iyo abaalkooda iyo kuwa xun iyo waxay muteen, tan kale abuurka (Nabi) Ciise wuxuu u eg yahay kii Nabi Aadam xagga aabbo la'aanta, iyo in Alle siduu doono wax u abuuro wax la shakiyana ma ahayn, waxaana jidaysan in ciddii xaqa ku doodda intuu caddaaday lala habaartamo, aayaduhuna waxay soo dageen mar wafdi gaalada nasaarada ah ka yimid xagga najraan ayna ku murmeen xaalka Nabi Ciise, waxayna ka cabsadeen inay Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ay la habaartamaan, maxaa yeelay way sii khasaari lahaayeen. **[Aali-Cimraan, 56-61]**

إِنَّ هَٰذَا لَهُوَ ٱلۡقَصَصُ ٱلۡحَقُّۚ وَمَا مِنۡ إِلَٰهٍ إِلَّا ٱللَّهُۚ وَإِنَّ ٱللَّهَ لَهُوَ ٱلۡعَزِيزُ ٱلۡحَكِيمُ ﴿٦٢﴾

62. Kaas (quraanka) unbaa qisooyin xaq ah, Allaah mooyee macbuud kaloo xaqa ma jiro, Alle na waa adkaade falsan.

فَإِن تَوَلَّوۡاْ فَإِنَّ ٱللَّهَ عَلِيمُۢ بِٱلۡمُفۡسِدِينَ ﴿٦٣﴾

63. Hadday jeedsadaan gaaladuna Alle waa og yahay kuwa wax fasahaadiya.

قُلۡ يَٰٓأَهۡلَ ٱلۡكِتَٰبِ تَعَالَوۡاْ إِلَىٰ كَلِمَةٖ سَوَآءِۭ بَيۡنَنَا وَبَيۡنَكُمۡ أَلَّا نَعۡبُدَ إِلَّا ٱللَّهَ وَلَا نُشۡرِكَ بِهِۦ شَيۡـٔٗا وَلَا يَتَّخِذَ بَعۡضُنَا بَعۡضًا أَرۡبَابٗا مِّن دُونِ ٱللَّهِۚ فَإِن تَوَلَّوۡاْ فَقُولُواْ ٱشۡهَدُواْ بِأَنَّا مُسۡلِمُونَ ﴿٦٤﴾

64. Waxaad dhahdaa Nabiyow ehelu kitaabow u kaalaya kalimo (odhaah) aan u simannahay aniga iyo adinkaba oo ah inaynaan caabudin Alle mooyee (wax kale), oynaan lana wadaajin waxba, kana yeelan

qaarkeen qaar Rabbiyaal, hadday jeedsadaanna waxaad dhahdaa marag noqda inaan muslimiin nahay.

65. Ehelu kitaabow maxaad ugu murmaysaan (Nabi) Ibraahim, tawreed iyo injiilba lama soo dejin gadaashiisa mooyee, meydaan wax kasayn.

يَٰٓأَهۡلَ ٱلۡكِتَٰبِ لِمَ تُحَآجُّونَ فِيٓ إِبۡرَٰهِيمَ وَمَآ أُنزِلَتِ ٱلتَّوۡرَىٰةُ وَٱلۡإِنجِيلُ إِلَّا مِنۢ بَعۡدِهِۦٓۚ أَفَلَا تَعۡقِلُونَ ٦٥

Quraanka uun baa qisooyin xaq ah ku sugan yihiin, Allaah mooyee ku xaq lugu caabudaa ma jiro, waana adkaade falsan, ciddii xaqa ka jeedsatana Alle waa og yahay iyo fasaadiyaasha, xaqana cidna gaar uma laha ee waa loo siman yahay, sidoo kale cibaadada Alle iyo inaan qaar qaarka kale ka rabbi yeelannin kuna raacin qallooc, ciddii xaqa ka jeedsatana ha ogaato inaan annagu mu'miniin nahay, yuhuud iyo nasaarana ma aha inay ku murmaan in Nabi Ibraahim ka mid ahaa, illeen tawreed iyo injiilba waxaa la soo dajiyey gadaashiiye, Bukhaari waxaa ku sugnaaday in Abuu Sufyaan u galay qaysarkii ruum, markaas warsaday qaysar Nabiga tilmaantiisa, nasabkiisa, wuxuu u yeedhi iyo runtiisa markuu u wada sheegayna uu yidhi: waa sidaas Nabiyada tilmaantoodu. **[Aali-Cimraan, 62-65]**

66. Kuwanow (yuhuud iyo nasaaro) waxaad ku muranteen waxaad wax ka og tihiin ee maxaad ugu murmeysaan waxaydaan cilmi u lahayn, Alle ayaa og idinkuse wax ma ogidiin.

هَٰٓأَنتُمۡ هَٰٓؤُلَآءِ حَٰجَجۡتُمۡ فِيمَا لَكُم بِهِۦ عِلۡمٞ فَلِمَ تُحَآجُّونَ فِيمَا لَيۡسَ لَكُم بِهِۦ عِلۡمٞۚ وَٱللَّهُ يَعۡلَمُ وَأَنتُمۡ لَا تَعۡلَمُونَ ٦٦

67. Ma ahayn (Nabi) Ibraahim yuhuud iyo nasaara (midna) wuxuuse ahaa toosane muslim ah kana mid ma ahayn mushrikiinta (gaalada).

مَا كَانَ إِبۡرَٰهِيمُ يَهُودِيّٗا وَلَا نَصۡرَانِيّٗا وَلَٰكِن كَانَ حَنِيفٗا مُّسۡلِمٗا وَمَا كَانَ مِنَ ٱلۡمُشۡرِكِينَ ٦٧

68. Waxaa dadka ugu mudan (Nabi) Ibraahim kuwii raacay iyo Nabigan (Muxamad ah) iyo kuwa (xaqa rumeeyey) Alle na waa waliga (gargaare) mu'miniinta.

إِنَّ أَوۡلَى ٱلنَّاسِ بِإِبۡرَٰهِيمَ لَلَّذِينَ ٱتَّبَعُوهُ وَهَٰذَا ٱلنَّبِيُّ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْۗ وَٱللَّهُ وَلِيُّ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ ٦٨

وَدَّت طَّآئِفَةٌ مِّنْ أَهْلِ ٱلْكِتَٰبِ لَوْ يُضِلُّونَكُمْ وَمَا يُضِلُّونَ إِلَّآ أَنفُسَهُمْ وَمَا يَشْعُرُونَ ﴿٦٩﴾

69. Waxay jeclaatay koox ka mid ah ehelu kitaabka inay idin baadiyeeyaan, mana baadiyeeyaan waxaan naftooda ahayn, mana kasayaan.

يَٰٓأَهْلَ ٱلْكِتَٰبِ لِمَ تَكْفُرُونَ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ وَأَنتُمْ تَشْهَدُونَ ﴿٧٠﴾

70. Ehelu kitaabow maxaad uga gaaloobaysaan aayaadka Alle idinkoo marag ah (og xaqnimadeeda).

يَٰٓأَهْلَ ٱلْكِتَٰبِ لِمَ تَلْبِسُونَ ٱلْحَقَّ بِٱلْبَٰطِلِ وَتَكْتُمُونَ ٱلْحَقَّ وَأَنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿٧١﴾

71. Ehelu kitaabow maxaad ugu khaldaysaan xaqa baadil (xumaan) oo u qarineysaan xaqa idinkoo og.

Yuhuud iyo nasaara iyo gaalada kalaba ma daayaan muran iyo dood, waxay ku murmaan waxayan waxba ka ogayn, sida xaalka Nabi Ibraahim, Nabi Ibraahimna ma ahayn yuhuud iyo nasaara midna, wuxuuse ahaa muslim toosan, oon gaalada wax ka dhexeeynin, waxaana ugu dhaw dadka intii raacday iyo Nabiga Muxamad ah iyo mu'miniinta, Alle na waa gargaaraha mu'miniinta, waxayna dooni ehelu kitaabku (yuhuud iyo nasaara) qaarkood inay idin dhumiyaan, naftooda unbayse dhumin mase oga, hadday ka gaaloobaan aayaadka Alle ama xaqa iyo xumaanta isku khaldaan ama xaqa qariyaan iyaga unbay dhibi.

Cabdullaahi binu Mascuud waxaa laga wariyey in Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) yidhi: Nabi kasta wuxuu leeyahay sokeeye Nabiyada ka mid ah sokeeyahayguna waa aabbahay, jeclaha Alle, Nabi Ibraahim korkiisa nabadgalyo ha ahaatee. **[Aali-Cimraan, 66-71]**

وَقَالَت طَّآئِفَةٌ مِّنْ أَهْلِ ٱلْكِتَٰبِ ءَامِنُوا۟ بِٱلَّذِىٓ أُنزِلَ عَلَى ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَجْهَ ٱلنَّهَارِ وَٱكْفُرُوٓا۟ ءَاخِرَهُۥ لَعَلَّهُمْ يَرْجِعُونَ ﴿٧٢﴾

72. Waxay dhaheen koox ka mid ah ehelu kitaabka rumeeya waxa lagu soo dajiyey kuwa (xaqa) rumeeyey (quraanka) maalinta horteeda kana gaalooba maalinta gadasheeda waxay u dhaw yihiin mu'miniintu inay noqdaane (gaaloobaan).

وَلَا تُؤْمِنُوٓا۟ إِلَّا لِمَن تَبِعَ دِينَكُمْ قُلْ إِنَّ ٱلْهُدَىٰ هُدَى ٱللَّهِ أَن يُؤْتَىٰٓ أَحَدٌ

73. Hana rumeynina ruuxaan diintiinna raacin, waxaad dhahdaa hanuun waa hanuunka

مِّثْلَ مَآ أُوتِيتُمْ أَوْ يُحَآجُّوكُمْ عِندَ رَبِّكُمْ ۗ قُلْ إِنَّ ٱلْفَضْلَ بِيَدِ ٱللَّهِ يُؤْتِيهِ مَن يَشَآءُ ۗ وَٱللَّهُ وَٰسِعٌ عَلِيمٌ ﴿٧٣﴾

Alle, xasad aad xasdeysaan, in la siiyo cid wax la mid ah waxa laydin siiyey ama idinkula doodaan Allihiin agtiisa, waxaad dhahdaa fadligu gacanta Alle yuu ku sugan yahay wuxuuna siiyaa cidduu doono, Alle na waa waasac (deeq badane) og.

يَخْتَصُّ بِرَحْمَتِهِۦ مَن يَشَآءُ ۗ وَٱللَّهُ ذُو ٱلْفَضْلِ ٱلْعَظِيمِ ﴿٧٤﴾

74. Wuxuuna ku gaar yeelaa naxariistiisa cidduu doono, Alle ayaana iska leh fadliga wayn.

Gaaladu had iyo jeer waa colka muslimiinta, halkanna waxaad ku arkeysaan akhlaaq xumadooda iyo khayaamadooda, iyagoo is faray inay isu muujiyaan niska hore muslimiin, niska dambana muujiyaan gaalnimo, si ay muslimiinta ugu beeraan shaki iyo walaac, una dhahaan kuwii cilmiga lahaa ee rumeeyey niskii hore waa kuwaa ka baxeen niskii dambana, waxay kalooy is fareen inayna aaminin ruuxaan iyaga raacin xasad iyo xumaan darteed, Alle ayaase iska leh fadliga iyo wanaagga siinna cidduu doono, naxariistiisana ku khaas yeeli cidduu doono oo mu'miniinta ah, illeen waa deeq badanee, taasina waxay inooga digi gaalada iyo dhagartooda iyo niyad xumaantooda iyo in laga foojignaado. **[Aali-Cimraan, 72-74]**

* وَمِنْ أَهْلِ ٱلْكِتَٰبِ مَنْ إِن تَأْمَنْهُ بِقِنطَارٍ يُؤَدِّهِۦٓ إِلَيْكَ وَمِنْهُم مَّنْ إِن تَأْمَنْهُ بِدِينَارٍ لَّا يُؤَدِّهِۦٓ إِلَيْكَ إِلَّا مَا دُمْتَ عَلَيْهِ قَآئِمًا ۗ ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ قَالُوا۟ لَيْسَ عَلَيْنَا فِى ٱلْأُمِّيِّـۧنَ سَبِيلٌ وَيَقُولُونَ عَلَى ٱللَّهِ ٱلْكَذِبَ وَهُمْ يَعْلَمُونَ ﴿٧٥﴾

75. Ehelu kitaabka waxaa ka mid ah ruux haddaad ku aaminto xoolo badan ku siin (nasaarada qaarkeed) waxaana ka mid ah mid haddaad ku aaminto diinaar aan ku siinaynin, inaad kor taagnaato mooyee (waa yuhuudda iyo wixii la mid ah), waxaana ugu wacan arrintaas inay dhaheen naguma laha ummiyiintu jid, waxayna ku dhihi Alle been iyagoo og.

بَلَىٰ مَنْ أَوْفَىٰ بِعَهْدِهِۦ وَٱتَّقَىٰ فَإِنَّ ٱللَّهَ يُحِبُّ ٱلْمُتَّقِينَ ﴿٧٦﴾

76. Saas ma aha ee ruuxii oofiya ballankiisa oo dhawrsada Alle waa jecel yahay dhawrsadayaasha.

77. Kuwa ku gata ballankii Alle iyo dhaartoodii lacag (qiimo) yar kuwaasu nasiib kuma laha aakhiro, lamana hadlo Alle (si naxariis ah) mana dayo xaggooda maalinta qiyaame, mana daahiriyo, waxayna mudan cadaab daran.

إِنَّ ٱلَّذِينَ يَشْتَرُونَ بِعَهْدِ ٱللَّهِ وَأَيْمَٰنِهِمْ ثَمَنًا قَلِيلًا أُو۟لَٰٓئِكَ لَا خَلَٰقَ لَهُمْ فِى ٱلْـَٔاخِرَةِ وَلَا يُكَلِّمُهُمُ ٱللَّهُ وَلَا يَنظُرُ إِلَيْهِمْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ وَلَا يُزَكِّيهِمْ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٧٧﴾

Ehelu kitaabkii yuhuud iyo nasaara waxaa ka mid ahaa kuwo haddaad wax badan ku aaminto kuu soo celiya sida kuwii islaamay ama nasaarada qaarkeed, waxaase ka mid ah kuwo aan hal diinnaar haddaad ku aaminto aan ku siineyn inaad kor joogto mooyee sida yuhuudda oo dhihi xaq naguma leh muslimiintu beenna Alle ka sheega iyagoo wax og, waxaase Alle jecel yahay kuwa oofiya ballanka oo dhawrsada, ciddiise ku gadata ballanka Alle iyo dhaartiisa xoolo waa midaan nasiib ku lahayn aakhiro oon naxariis Alle na helayn qiyaamada cadaab daranna u sugnaaday. Rasuulkuna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): ruuxii ku goosta xoolo ruux muslim ah xaq darro dhaar wuxuu la kulmaa Alle isagoo u cadhaysan. (Imaam Axmed). Taasina waxay ku tusin in layska dhawro xaqa dadka oon xaq darro lagu cunin, haddii kale ha sugo halaag iyo ciqaab. **[Aali-Cimraan, 75-77]**

78. Waxaa ka mid ah (yuhuudda) koox ku leexisa carraabkooda kitaabka (quraanka) si aad ugu malaysaan kitaabka, kana mid ma aha kitaabka waxayna odhan isagu wuxuu ka ahaaday Alle agtiisa kamana ahaannin Alle agtiisa, waxayna ku dhihi Alle been iyagoo og.

وَإِنَّ مِنْهُمْ لَفَرِيقًا يَلْوُۥنَ أَلْسِنَتَهُم بِٱلْكِتَٰبِ لِتَحْسَبُوهُ مِنَ ٱلْكِتَٰبِ وَمَا هُوَ مِنَ ٱلْكِتَٰبِ وَيَقُولُونَ هُوَ مِنْ عِندِ ٱللَّهِ وَمَا هُوَ مِنْ عِندِ ٱللَّهِ ۖ وَيَقُولُونَ عَلَى ٱللَّهِ ٱلْكَذِبَ وَهُمْ يَعْلَمُونَ ﴿٧٨﴾

79. Kuma haboona dad in Alle siiyo kitaab, xigmad iyo Nabinnimo markaas ku dhaha dadka addoommo ii noqda Alle ka sokow, hasa yeeshee noqda culimo (dabeeco fiican) kitaabkaad baraysaan dartiis iyo waxaad baranaysaan.

مَا كَانَ لِبَشَرٍ أَن يُؤْتِيَهُ ٱللَّهُ ٱلْكِتَٰبَ وَٱلْحُكْمَ وَٱلنُّبُوَّةَ ثُمَّ يَقُولَ لِلنَّاسِ كُونُوا۟ عِبَادًا لِّى مِن دُونِ ٱللَّهِ وَلَٰكِن كُونُوا۟ رَبَّٰنِيِّـۧنَ بِمَا كُنتُمْ تُعَلِّمُونَ ٱلْكِتَٰبَ وَبِمَا كُنتُمْ تَدْرُسُونَ ﴿٧٩﴾

وَلَا يَأۡمُرَكُمۡ أَن تَتَّخِذُواْ ٱلۡمَلَـٰٓئِكَةَ وَٱلنَّبِيِّـۧنَ أَرۡبَابًاۚ أَيَأۡمُرُكُم بِٱلۡكُفۡرِ بَعۡدَ إِذۡ أَنتُم مُّسۡلِمُونَ ﴿٨٠﴾

80. Idinmana farayo Alle inaad ka yeelataan malaa'igta iyo Nabiyada Rabbiyaal, ma wuxuu idin fari gaalnimo intaad muslim noqoteen ka dib.

Yuhuud waxaa caadadeeda ka mid ah xaq diiddo iyo hadal leexin, waxaana ka mid ah kuwo baddala hadalka Alle oo waji kale u yeela si ay dadkaan wax aqoonnin ugu khaldaan, iyagoo dhihi wuxuu ka soo dagay xagga Alle, kamana imaan xagga Alle ee waa been ay og yihiin. Diinta islaamkuna ma oggola in cidaan Alle ahayn la caabudo ama addoon loo noqdo aad caabudid, waase in la noqdaa culimo toosan marba haddaad kitaabka akhriyeysaan ama baranaysaan, Alle na ma faraayo in laga yeesho malaa'igta iyo Nabiyada llaahyo, Alle na gaalnimo ma faraayo cidna, waxayna soo degtay aayaduhu mar gaalo yuhuud iyo nasaara ah ku dhaheen Nabiga ma waxaad noogu yeedhi inaan ku caabudno sidii Ciise loo caabuday, oo Nabigu yidhi: Alle Ayaan ka magan galay inaan caabudo wax ka soo hadhay, daxaagna wuxuu yidhi: waxaa xaq ku ah ruuxii quraan baran inuu faqiih ahaado. **[Aali-Cimraan, 78-80]**

وَإِذۡ أَخَذَ ٱللَّهُ مِيثَـٰقَ ٱلنَّبِيِّـۧنَ لَمَآ ءَاتَيۡتُكُم مِّن كِتَـٰبٍ وَحِكۡمَةٍ ثُمَّ جَآءَكُمۡ رَسُولٌ مُّصَدِّقٌ لِّمَا مَعَكُمۡ لَتُؤۡمِنُنَّ بِهِۦ وَلَتَنصُرُنَّهُۥۚ قَالَ ءَأَقۡرَرۡتُمۡ وَأَخَذۡتُمۡ عَلَىٰ ذَٰلِكُمۡ إِصۡرِيۖ قَالُوٓاْ أَقۡرَرۡنَاۚ قَالَ فَٱشۡهَدُواْ وَأَنَا۠ مَعَكُم مِّنَ ٱلشَّـٰهِدِينَ ﴿٨١﴾

81. (Xusuuso) markuu ka qaaday Alle ballan adag Nabiyada waxaan idin siiyo oo kitaab iyo xigmo ah markaas idiin yimaado rasuul rumeyn waxaad haysataan waa inaad rumeysaan una gargaartaan, kuna yidhi (Alle): ma qirteen oo ma qaaddeen arrintaas ballankeyga ah oo dheheen waan qirnay (oggolaannay) markaas ku yidhi: marag ka noqda anna la jirkiinna yaan ka mid noqon kuwa marag kici.

فَمَن تَوَلَّىٰ بَعۡدَ ذَٰلِكَ فَأُوْلَـٰٓئِكَ هُمُ ٱلۡفَـٰسِقُونَ ﴿٨٢﴾

82. Ruuxiise jeedsada intaas ka dib kuwaasi waa kuwo faasiqiin ah.

أَفَغَيۡرَ دِينِ ٱللَّهِ يَبۡغُونَ وَلَهُۥٓ أَسۡلَمَ مَن فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ طَوۡعًا وَكَرۡهًا

83. Ma diinta Alle waxaan ahayn yey rabaan isagoo uu u hoggaansamay waxa

samaawaadka iyo dhulka ku sugan oggolaan iyo ikraahba, xaggiisaana loo celin (dadka).

وَإِلَيْهِ يُرْجَعُونَ ﴿٨٣﴾

84. Waxaad dhahdaa waxaan rumaynay Alle iyo waxa nalagu soo dajiyey iyo waxa lagu soo dajiyey (Nabi) Ibraahim, Ismaaciil, Isxaaq, Yacquub, faracyadii, wixii laga siiyey Muuse, Ciise iyo Nabiyadii xagga Rabbigood, kala bixin mayno dhexdooda anaguna Alle ayaan u hoggaansameynaa.

قُلْ ءَامَنَّا بِٱللَّهِ وَمَآ أُنزِلَ عَلَيْنَا وَمَآ أُنزِلَ عَلَىٰٓ إِبْرَٰهِيمَ وَإِسْمَٰعِيلَ وَإِسْحَٰقَ وَيَعْقُوبَ وَٱلْأَسْبَاطِ وَمَآ أُوتِىَ مُوسَىٰ وَعِيسَىٰ وَٱلنَّبِيُّونَ مِن رَّبِّهِمْ لَا نُفَرِّقُ بَيْنَ أَحَدٍ مِّنْهُمْ وَنَحْنُ لَهُۥ مُسْلِمُونَ ﴿٨٤﴾

85. Ruxii doona diin aan islaamka ahayn laga aqbali maayo, aakhirana wuxuu ka mid noqon kuwa khasaaray.

وَمَن يَبْتَغِ غَيْرَ ٱلْإِسْلَٰمِ دِينًا فَلَن يُقْبَلَ مِنْهُ وَهُوَ فِى ٱلْءَاخِرَةِ مِنَ ٱلْخَٰسِرِينَ ﴿٨٥﴾

Waxay aayaduhu caddayn in Alle ballan adag ka qaaday Nabiyada inay isrumeeyaan isuna gargaaraan, siduu ballan uga qaaday in hadday haleelaan Nabiga Muxamed ah u rumeeyaan uguna gargaaraan, ayna aqbaleen ciddii ka leexatana ay xumaan, xaqna ma aha in waxaan diinta islaamka ahayn la doono, illee Alle ayaa wax kastaa u hoggaansamaye waana in la rumeeyo Nabiyada Alle dhammaantood lana kala saarin, diinaan islaamka ahayn ruuxii doonana wax lagama aqbalo wuuna khasaari aakhiro, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: ruuxii camal fala waxaan haysanno waxaan ahayn waa lagu celin. Waa saxiix. **[Aali-Cimraan, 81-84]**

86. Sidee u hanuunin Alle qoom gaaloobay rumayn ka dib, oo qiray in rasuulku xaq yahay una yimaadeen xujooyin, Alle na ma hanuuniyo qoom daalimiin ah.

كَيْفَ يَهْدِى ٱللَّهُ قَوْمًا كَفَرُوا۟ بَعْدَ إِيمَٰنِهِمْ وَشَهِدُوٓا۟ أَنَّ ٱلرَّسُولَ حَقٌّ وَجَآءَهُمُ ٱلْبَيِّنَٰتُ ۚ وَٱللَّهُ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٨٦﴾

87. Kuwaas abaalkoodu waa lacnad Alle oo korkooda ah iyo malaa'igta iyo dadka dhammaantiis.

أُو۟لَٰٓئِكَ جَزَآؤُهُمْ أَنَّ عَلَيْهِمْ لَعْنَةَ ٱللَّهِ وَٱلْمَلَٰٓئِكَةِ وَٱلنَّاسِ أَجْمَعِينَ ﴿٨٧﴾

خَٰلِدِينَ فِيهَا لَا يُخَفَّفُ عَنْهُمُ ٱلْعَذَابُ وَلَا هُمْ يُنظَرُونَ ﴿٨٨﴾

88. Wayna ku waari (ciqaatbtooda) dhexdeeda lagamana fududeeyo cadaabka lamana sugo.

إِلَّا ٱلَّذِينَ تَابُوا۟ مِنۢ بَعْدِ ذَٰلِكَ وَأَصْلَحُوا۟ فَإِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٨٩﴾

89. Kuwo toobad keena intaas ka dib mooyee oo wanaajiya, Alle na waa dambi dhaafe naxariista.

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ بَعْدَ إِيمَٰنِهِمْ ثُمَّ ٱزْدَادُوا۟ كُفْرًا لَّن تُقْبَلَ تَوْبَتُهُمْ وَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلضَّآلُّونَ ﴿٩٠﴾

90. Kuwa gaalooba rumayn ka dib, markaas kororsada gaalnimo lagama aqbalo toobadooda, kuwaasina waa kuwa dhumay.

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَمَاتُوا۟ وَهُمْ كُفَّارٌ فَلَن يُقْبَلَ مِنْ أَحَدِهِم مِّلْءُ ٱلْأَرْضِ ذَهَبًا وَلَوِ ٱفْتَدَىٰ بِهِۦٓ ۗ أُو۟لَٰٓئِكَ لَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ وَمَا لَهُم مِّن نَّٰصِرِينَ ﴿٩١﴾

91. Kuwii gaaloobay oo dhintay iyagoo gaalo ah lagama aqbalo mid ka mid ah dhulka muggii oo dahab ah hadduu isku furto, kuwaasina waxaa u sugnaaday cadaab daran wax u gargaarana ma leh.

Alle Ayaan ka magangallay dhumid hanuun ka dib. Waxay soo dageen aayaduhu mar nin reer madiina ahaa islaamay haddana gaalnimo u noqday haddana qoomameeyay oo cid uu warsaday inuu toobad leeyahay iyo in kale, wuxuuna mudan ruuxii islaanimo ka dib laabta ciqaab daran oo uu ku waari, ciddiise toobad keenta wuu ka aqbali Alle una dhaafi dambiga, ciddiise ku sii madax adaygta gaalnimada oo sii korarsata toobad lagama aqbalo wayna baadiyoobeen, ciddii saas ku dhimatana lagama aqbalo dhulka muggiis oo dahab ah hadduu isku furto, wuxuuna mudan cadaab daran, wax u gargaarina ma jiro. Waxaa sugnaaday in mid ehelu naarka ah loo dhihi qiyaamada: ka warran haddaad leedahay waxa dhulka ku suggan maysku furan lahayd? Markaasuu dhihi: haa, markaasuu Alle dhihi: wax ka fudud yaan kaa doonnay oo ballan kaaga qaaday duudkii Nabi Aadam waa inaadan ii shariig yeelin (ila caabudin wax kale) waadna diidday gaalnimo mooyee, (Bukhaari, Muslim). **[Aali-Cimraan, 86-91]**

لَن تَنَالُوا۟ ٱلْبِرَّ حَتَّىٰ تُنفِقُوا۟ مِمَّا تُحِبُّونَ ۚ وَمَا تُنفِقُوا۟ مِن شَىْءٍ فَإِنَّ ٱللَّهَ بِهِۦ عَلِيمٌ ﴿٩٢﴾

92. Ma gaadhaan sama fal intaad wax ka bixisaan waxaad jeceshihiin, waxaad bixisaanna Alle waa og yahay.

كُلُّ ٱلطَّعَامِ كَانَ حِلًّا لِّبَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ إِلَّا مَا حَرَّمَ إِسْرَٰٓءِيلُ عَلَىٰ نَفْسِهِۦ مِن قَبْلِ أَن تُنَزَّلَ ٱلتَّوْرَىٰةُ ۗ قُلْ فَأْتُوا۟ بِٱلتَّوْرَىٰةِ فَٱتْلُوهَآ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٩٣﴾

93. Cuntada dhammaanteed xalaal bay u ahayd banii israa'iil wuxuu ka reebay Israa'iil naftiisa mooyee, soo degiddii tawreed ka hor, waxaad dhahdaa: keena tawreed oo akhriya haddaad runlow tihiin.

فَمَنِ ٱفْتَرَىٰ عَلَى ٱللَّهِ ٱلْكَذِبَ مِنۢ بَعْدِ ذَٰلِكَ فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلظَّٰلِمُونَ ﴿٩٤﴾

94. Ruuxii ku been abuurta Alle korkiisa intaas ka dib kuwaasu waa uun daalimiin.

قُلْ صَدَقَ ٱللَّهُ ۗ فَٱتَّبِعُوا۟ مِلَّةَ إِبْرَٰهِيمَ حَنِيفًا ۖ وَمَا كَانَ مِنَ ٱلْمُشْرِكِينَ ﴿٩٥﴾

95. Waxaad dhahdaa run buu sheegay Alle, ee raaca milladda Ibraahiim (jidkiisii) isagoo toosan, kamana mid ahayn mushrikiinta.

Aayaddu waxay caddayn inaan wanaagga dhabta ah la gaadhayn inta laga bixiyo waxa la jecel yahay qaarkiis, markay aayaddu soo degtay yaa abuu dhalxa beertiisii sadaqaystay. Markaasaa Nabigu faray (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu qaraabadiisa ku sadaqaysto, markaasuu u qaybiyey. Tan kale; waxay ahayd yuhuud tahayna xaq diidayaal warsi iyo xujo badan, waxayna Nabiga warsadeen wixii ka reebanaa Israa'iil oo cunno ahaa, wuxuuna Alle u sheegay in cunnadu xalaal u ahayd wuxuu isagu is ka reebay mooyee, tawreed ka hor, ee ha akhriyeen tawreed hadday run sheegi, ciddiise been abuurta waa daalimad, Alle na run buu sheegay ee halla raaco waddadii Nabi Ibraahim oo ah diinta islaamka ah, gaalana wax isuma ahayn Nabi Ibraahim.

Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: Israa'iil "waa Yacquub", wuxuuna ku nadray hadduu Alle caafiyo inuusan cunin xubnaha qaarkood isaga iyo caruurtiisu. **[Aali-Cimraan, 92-95]**

إِنَّ أَوَّلَ بَيْتٍ وُضِعَ لِلنَّاسِ لَلَّذِى بِبَكَّةَ مُبَارَكًا وَهُدًى لِّلْعَٰلَمِينَ ﴿٩٦﴾

96. Guriga ugu horreeyey ee looga yeelay dadka (meelay ku cibaadeystaan) waa kan maka (kacbada) waana barakaysan yahay waana hanuunka caalamka.

فِيهِ ءَايَٰتٌۢ بَيِّنَٰتٌ مَّقَامُ إِبْرَٰهِيمَ ۖ وَمَن دَخَلَهُۥ كَانَ ءَامِنًا ۗ وَلِلَّهِ عَلَى ٱلنَّاسِ

97. Waxaa ku sugan aayaad cad cad maqaamu Ibraahiimna (waa ku yaal), ruuxii galana wuxuu

ahaan aamin, Alle na wuxuu ku leeyahay dadka xajka baydka ruuxii kara waddada, ruuxii gaaloobana Alle waa ka kaaftoon yahay caalamka.

حِجُّ ٱلْبَيْتِ مَنِ ٱسْتَطَاعَ إِلَيْهِ سَبِيلًا ۚ وَمَن كَفَرَ فَإِنَّ ٱللَّهَ غَنِىٌّ عَنِ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٩٧﴾

98. Waxaad dhahdaa ehelu kitaabow maxaad uga gaaloobaysaan aayaadka Alle, isagoo Alle na marag u yahay waxaad camal falaysaan.

قُلْ يَٰٓأَهْلَ ٱلْكِتَٰبِ لِمَ تَكْفُرُونَ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ وَٱللَّهُ شَهِيدٌ عَلَىٰ مَا تَعْمَلُونَ ﴿٩٨﴾

99. Ehelu kitabow maxaad uga celinaysaan jidka Alle ruuxii rumeyn idinkoo la dooni (xaqa) qallooc idinkoo marag ah, Alle na ma halmaansana waxaad falaysaan.

قُلْ يَٰٓأَهْلَ ٱلْكِتَٰبِ لِمَ تَصُدُّونَ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ مَنْ ءَامَنَ تَبْغُونَهَا عِوَجًا وَأَنتُمْ شُهَدَآءُ ۗ وَمَا ٱللَّهُ بِغَٰفِلٍ عَمَّا تَعْمَلُونَ ﴿٩٩﴾

Alle wuxuu sheegi in guriga ugu horreeyey in Alle lagu caabudo uu yahay kacbada, Alle na waa sharrifay baydkaas iyo masaajidka barakaysan ee Maka, waxaana ku sugan aayado waaweyn oo uu ka mid yahay maqaamu Ibraahiim, ciddii gashana waa aamin, Alle na dadka wuxuu ku waajibiyey ciddii karta inay u xajiyaan baydkaas, ciddii iska diida isagoo karana Alle waa ka kaaftoon yahay gaalo. Abuudar waxaa laga wariyey inuu yidhi: waxaan idhi: Rasuulka Allow masaajidkee u horreeyey? Markaasuu yidhi masaajidka xurmaysan (ee Maka) waxaan idhi yaa ku xiga? Waxuu yidhi: Masaajidka Aqsa (ee Qudsi) waxaan idhi immisaa u dhaxaysay? Wuxuu yidhi: afartan, waxaan idhi: yaa ku xigay? Wuxuuna yidhi meeshii salaadi kugu haleeshaba ku tuko dhammaan waa masaajide (imaam Axmed). Yuhuud iyo nasaarana xaqay ka gaaloobi iyagoo arka, kana leexin dadka, ayna ceebayni oo qalloocin, waana wax la yaab leh inay saasu caado u tahay. Maantadan aan joogno waxay muslimiinta iyo diinta islaamka ku hayaan wax la helmaami karo ma aha. **[Aali-Cimraan, 96-99]**

100. Kuwa (xaqa) rumeeyow haddaad adeecdaan (maqashaan) koox ka mid ah kuwa la siiyey kitaabka (yuhuud iyo nasaara) waxay idiin celin iimaankiinna ka dib gaalnimo.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ إِن تُطِيعُوا۟ فَرِيقًا مِّنَ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْكِتَٰبَ يَرُدُّوكُم بَعْدَ إِيمَٰنِكُمْ كَٰفِرِينَ ﴿١٠٠﴾

وَكَيْفَ تَكْفُرُونَ وَأَنتُمْ تُتْلَىٰ عَلَيْكُمْ
ءَايَٰتُ ٱللَّهِ وَفِيكُمْ رَسُولُهُۥ ۗ وَمَن
يَعْتَصِم بِٱللَّهِ فَقَدْ هُدِىَ إِلَىٰ صِرَٰطٍ
مُّسْتَقِيمٍ ﴿١٠١﴾

101. Seed u gaaloobaysaan idinkoo laydinku kor akhrin aayaadka Alle dhexdiinnana joogo rasuulkiisii, ruuxii cuskada Alle (oo ka dhawrsada) waxaa lagu hanuuniyey jidka toosan.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱتَّقُواْ ٱللَّهَ
حَقَّ تُقَاتِهِۦ وَلَا تَمُوتُنَّ إِلَّا وَأَنتُم
مُّسْلِمُونَ ﴿١٠٢﴾

102. Kuwa (xaqa) rumeeyow ka dhawrsada Alle dhawrsashadiisa xaqa ah, hana dhimannina idinkoon muslim ahayn.

وَٱعْتَصِمُواْ بِحَبْلِ ٱللَّهِ جَمِيعًا وَلَا تَفَرَّقُواْ ۚ
وَٱذْكُرُواْ نِعْمَتَ ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ إِذْ كُنتُمْ
أَعْدَآءً فَأَلَّفَ بَيْنَ قُلُوبِكُمْ فَأَصْبَحْتُم
بِنِعْمَتِهِۦٓ إِخْوَٰنًا وَكُنتُمْ عَلَىٰ شَفَا حُفْرَةٍ
مِّنَ ٱلنَّارِ فَأَنقَذَكُم مِّنْهَا ۗ كَذَٰلِكَ
يُبَيِّنُ ٱللَّهُ لَكُمْ ءَايَٰتِهِۦ لَعَلَّكُمْ
تَهْتَدُونَ ﴿١٠٣﴾

103. Qabsada xadhigga Alle (islaamka) dhammaantiin hana kala tagina, xusana nicmada Alle ee korkiinna ah, markaad col ahaydeen oos isu dumay quluubtiinna ood noqoteen nicmada Alle darteed walaalo, idinkoo ahaa qar god naar ah, oos idinka koriyey xaggeeda, saasuu idiinku caddayn Alle aayaadkiisii si aad u hanuuntaan.

Alle wuxuu sheegay in hadday mu'miniintu maqlaan warka gaalada ay xasdi jidka xaqa ahna ka leexin, maxaa yeelay gaaladu waa colka mu'miinta waxayna ku dadaali say u gaalayn lahaayeen, mana habboona in la gaaloobo iyadoo xaqa la haysto oo cad yahay, tan kale waa in Alle la cuskadaa, cibaado dhab ahna la caabudaa, muslinnimana lagu dhintaa, lana qabsado dhammaan xadhigga Alle oon lana kala tagin. Lana xusuusnaado sida Alle isugu soo dumay qalbiga muslimiinta iyagoo col ahaan jiray, ku dhicid naareedna u dhawaa kana koriyey, una caddeeyay aayaadka Alle si ay u hanuunaan. Waxaa sugnaatay: dhawrsashada Alle waa in la adeecoon la caasiyin, laguna mahdiyaa lagana gaaloobin, lana xusoo la halmaamin (Xaakim, waa hadalki Ibni Mascuud). Tilmaanta quraankana waxaa ka mid ah: inuu yahay xadhiggii Alle ee adkaa iyo jidkiisii toosnaa, waxaase loo baahan yahay walaalnimo, isku duubnaan, xaq raacid, gaalo ka digtoonaan iyo toosnaan. **[Aali-Cimraan, 100-103]**

وَلۡتَكُن مِّنكُمۡ أُمَّةٞ يَدۡعُونَ إِلَى ٱلۡخَيۡرِ وَيَأۡمُرُونَ بِٱلۡمَعۡرُوفِ وَيَنۡهَوۡنَ عَنِ ٱلۡمُنكَرِۚ وَأُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلۡمُفۡلِحُونَ ١٠٤

104. Ha laydinka helo ummad u yeedha khayrka oo fari wanaagga oo ka reebta waxa la naco (xumaanta) kuwaasina waa uun kuwa liibaanay.

وَلَا تَكُونُواْ كَٱلَّذِينَ تَفَرَّقُواْ وَٱخۡتَلَفُواْ مِنۢ بَعۡدِ مَا جَآءَهُمُ ٱلۡبَيِّنَٰتُۚ وَأُوْلَٰٓئِكَ لَهُمۡ عَذَابٌ عَظِيمٞ ١٠٥

105. Hana noqonina kuwa kala tegay oo kale ee iskhilaafay intay u yimaadeen xujooyin ka dib kuwaasina waa kuwa cadaab weyn u sugnaaday.

يَوۡمَ تَبۡيَضُّ وُجُوهٞ وَتَسۡوَدُّ وُجُوهٞۚ فَأَمَّا ٱلَّذِينَ ٱسۡوَدَّتۡ وُجُوهُهُمۡ أَكَفَرۡتُم بَعۡدَ إِيمَٰنِكُمۡ فَذُوقُواْ ٱلۡعَذَابَ بِمَا كُنتُمۡ تَكۡفُرُونَ ١٠٦

106. Maalintay caddaan (nuuri) wajiyaal oyna madoobaan (doorsoomi) wajiyaal, kuway madoobaato wajiyadoodu (waxaa lagu dhihi): miyaad gaaloowdeen rumeyntiinnii ka dib, dhadhamiya cadaabka gaalnimadiinnii darteed.

وَأَمَّا ٱلَّذِينَ ٱبۡيَضَّتۡ وُجُوهُهُمۡ فَفِي رَحۡمَةِ ٱللَّهِۖ هُمۡ فِيهَا خَٰلِدُونَ ١٠٧

107. Kuwuu caddaado (nuuro) wajigoodu naxariista Alle dhexdeeday ku waarayaan.

تِلۡكَ ءَايَٰتُ ٱللَّهِ نَتۡلُوهَا عَلَيۡكَ بِٱلۡحَقِّۗ وَمَا ٱللَّهُ يُرِيدُ ظُلۡمٗا لِّلۡعَٰلَمِينَ ١٠٨

108. Taasi waa aayaadkii Alle oon ugu akhriyeynaa korkaaga si xaq ah, Alle na ma aha mid la doona dulmi caalamka.

وَلِلَّهِ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلۡأَرۡضِۚ وَإِلَى ٱللَّهِ تُرۡجَعُ ٱلۡأُمُورُ ١٠٩

109. Alle waxaa u sugnaaday waxa samaawaadka iyo dhulka ku sugan, xaggiisaana loo celiyaa umuuraha.

Ummaddan muslinka ah wuxuu Alle faray inay khayrka u yeedhaan, wanaaggana faraan, xumaanta reebaan, si ay u liibaanaan, oyna ka fogaadaan kala tag iyo iskhilaaf, iyagoo xaq u yimid, si ayna ula mid noqonnin gaalada cadaab daran mutay. Maalinta qiyaamana wajiyada mu'miniintu way dhalaali, kuwa gaaladuna way doorsoomi oo madoobaan, mu'miniintuna

jannay ku waari, gaaladuna naar bay dhadhamin, aayaadka Alle na waa xaq sugan, isagaana iska leh xukunka samooyinka iyo dhulka, umuuraha oo dhanna xaggiisaa loo celin, fadli badan yaana ku soo arooray khayrkoo lays faro iyo xumaanta oo layska reebo, waana tiirka diinta lslaamka, laguna sharrifay ummaddan Muxammdiyada ah. Rasuulkuna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): ruuxii arkaa xumaan ha ku dooriyo gacanta, hadduusan karin carrabka, hadduusan karin qalbiga, waana iimaanka u tabar yar. (Muslim). Mar kale wuxuu yidhi: Alle Ayaan ku dhaartee wanaagaad faraysaan oo xumantaanad reebaysaan ama wuxuu Alle u dhaw yahay inuu idinku diro ciqaab agtiisa ah, ood baridaan oosan idin ajiibin. (Axmed iyo kuwa kale). Taasina waxay ku tusin ahmiyadda umuurtaas iyo in ummaddii ka tagtaa ay mudan ciqaab halaag. **[Aali-Cimraan, 104-109]**

كُنتُمْ خَيْرَ أُمَّةٍ أُخْرِجَتْ لِلنَّاسِ
تَأْمُرُونَ بِٱلْمَعْرُوفِ وَتَنْهَوْنَ عَنِ
ٱلْمُنكَرِ وَتُؤْمِنُونَ بِٱللَّهِ ۗ وَلَوْ ءَامَنَ
أَهْلُ ٱلْكِتَٰبِ لَكَانَ خَيْرًا لَّهُم ۚ مِّنْهُمُ
ٱلْمُؤْمِنُونَ وَأَكْثَرُهُمُ ٱلْفَٰسِقُونَ ﴿١١٠﴾

110. Waxaad tihiin ummadda u khayrroon ee loo soo bixiyey dadka, waxaad fartaan wanaagga waxaadna ka reebtaan xumaanta waxaadna rumeysaan Alle, hadday rumeeyaan ehelu kitaabku (xaqa) saasaa u khayrroonaan lahayd, waxaa ka mid ah mu'miniin, badankoodna waa faasiqiin.

لَن يَضُرُّوكُمْ إِلَّآ أَذًى ۖ وَإِن يُقَٰتِلُوكُمْ
يُوَلُّوكُمُ ٱلْأَدْبَارَ ثُمَّ لَا يُنصَرُونَ ﴿١١١﴾

111. Idin wax yeellayn mahayaan wax dhib ah mooyee, hadday idin la dagaallamaanna waxay idiin jeedin dabada (way carari) loona gargaari maayo.

ضُرِبَتْ عَلَيْهِمُ ٱلذِّلَّةُ أَيْنَ مَا ثُقِفُوٓا۟ إِلَّا
بِحَبْلٍ مِّنَ ٱللَّهِ وَحَبْلٍ مِّنَ ٱلنَّاسِ وَبَآءُو
بِغَضَبٍ مِّنَ ٱللَّهِ وَضُرِبَتْ عَلَيْهِمُ
ٱلْمَسْكَنَةُ ۚ ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ كَانُوا۟ يَكْفُرُونَ
بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ وَيَقْتُلُونَ ٱلْأَنۢبِيَآءَ بِغَيْرِ حَقٍّ ۚ
ذَٰلِكَ بِمَا عَصَوا۟ وَّكَانُوا۟ يَعْتَدُونَ ﴿١١٢﴾

112. Waxaana lagu qaddaray korkooda dulli meel kastooy joogaanba, xadhig Alle iyo xadhig dad mooyee, waxayna la noqdaan caddho Alle, waxaana lagu qaddaray miskiinnimo, waxaana ugu wacan inay ka gaaloobaan aayaadka Alle dilayaanna Nabiyada

xaq darro, waxaana ugu wacan caasinnimadooda iyo xadgudubkooda.

Alle wuxuu sheegay in ummadda Muxamadiyada ah u khayr badan tahay umadaha, maxaa yeelay wanaaggay faraan, xumaantana way reebaan, Alle na way rumeeyaan. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: anagaa ugu dambeyna dadka uguna horrayn qiyaamada, uguna hor gali jannada, in kastoo horteen la siiyey kitaab inagana ka dib layna siiyey, waxaana Alle nagu hanuuniyey waxay isku khilaafeen oo xaq ah, kanina waa maalinkoodii (jimcihii) lugu waajibiyay, wayna isku khilaafeen, dadkuna innagay ina raacaan, barri yuhuud baa leh, barri dambana nasaara. (Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim). Xumaanta yuhuud iyo sida loo dulleeyeyna wax badan yuu quraanku ka warramay, hadday muslimiin dhab ah la dagaallamaanna way jabi ooy carari, dullibaana lagu qadaray iyo cadho Alle, illeen aayaadka Alle yey beeniyeene oo ambiyaday xaq darro ku dili jireen oo waxay la imaanayeen xumaan iyo xad gudub. Haddaanse aragno inay gaaladu ayaamahan isugu tageen muslimiinta, dhulkii islaamkana qabsadeen dadkiina laayeen taas waxaa sababay muslimiinta oon jahaad dhab ah jahaadin, si xaq ahna u raacin amarka Alle, markayse si dhab ah Alle u adeecaan xadhigga Alle na wada qabsadaan shaki ma laha inay adkaan, xaqoodana soo ceshan, caalamkana khayr ku hoggaamin sida Alle ballan qaaday. **[Aali-Cimraan, 110-112]**

113. Isku mid ma aha, ehelu kitaabka waxaa ka mid ah ummad u taagan (xaqa) oo akhrida aayaadka Alle saacadaha habeenka iyagoo sujuudsan, (waa Cabdullaahi binu Salaam iyo saaxiibadiis).

* لَيْسُوا۟ سَوَآءً ۗ مِّنْ أَهْلِ ٱلْكِتَٰبِ أُمَّةٌ قَآئِمَةٌ يَتْلُونَ ءَايَٰتِ ٱللَّهِ ءَانَآءَ ٱلَّيْلِ وَهُمْ يَسْجُدُونَ ﴿١١٣﴾

114. Rumeynna Alle iyo maalinta dambe, farana wanaagga kana reeba waxa la naco (xun) una dag dagi wanaagga, kuwaasi waxay ka mid yihiin kuwa suuban.

يُؤْمِنُونَ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ وَيَأْمُرُونَ بِٱلْمَعْرُوفِ وَيَنْهَوْنَ عَنِ ٱلْمُنكَرِ وَيُسَٰرِعُونَ فِى ٱلْخَيْرَٰتِ ۖ وَأُو۟لَٰٓئِكَ مِنَ ٱلصَّٰلِحِينَ ﴿١١٤﴾

115. Waxay falaan oo khayr ah lagama qariyo (dayaco), Alle na waa og yahay kuwa dhawrsada.

وَمَا يَفْعَلُوا۟ مِنْ خَيْرٍ فَلَن يُكْفَرُوهُ ۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌۢ بِٱلْمُتَّقِينَ ﴿١١٥﴾

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لَن تُغۡنِيَ عَنۡهُمۡ أَمۡوَٰلُهُمۡ وَلَآ أَوۡلَٰدُهُم مِّنَ ٱللَّهِ شَيۡـٔٗاۖ وَأُوْلَٰٓئِكَ أَصۡحَٰبُ ٱلنَّارِۖ هُمۡ فِيهَا خَٰلِدُونَ ١١٦

116. Kuwa gaaloobay kama kaafido xoolahoodu iyo caruurtoodu Alle xaggiisa waxba, kuwaasuna waa ehelka naarta wayna ku dhex waari.

مَّثَلُ مَا يُنفِقُونَ فِي هَٰذِهِ ٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَا كَمَثَلِ رِيحٖ فِيهَا صِرٌّ أَصَابَتۡ حَرۡثَ قَوۡمٖ ظَلَمُوٓاْ أَنفُسَهُمۡ فَأَهۡلَكَتۡهُۚ وَمَا ظَلَمَهُمُ ٱللَّهُ وَلَٰكِنۡ أَنفُسَهُمۡ يَظۡلِمُونَ ١١٧

117. Waxay bixiyaan noloshan adduunna waxay la mid tahay dabayl qabow (daran) oo ku dhacday beer qoom dulmiyey naftooda ooy halaagtay, ma dulmiyin Alle iyagaase naftooda dulmiyey.

Marka quraanku ehelu kitaabka wax ka sheegi wuxuu u jeedaa kuwa xaqa ka leexday, hase yeeshee kuwa rumeeyey xaqa sida asaxaabigii Cabdullaahi binu Salaam iyo saaxiibadiisii kale, kuwaasoo Alle ku tilmaamay aayadahan camalkoodii iyo waxa Alle ku abaal marin oo wanaag ah, kuwa xaqa ka gaaloobayse waxba uma taraan xoolo iyo caruuru, waxayna mudan naar, waxay adduunka ku bixiyeenna waxuu la mid yahay beer dabayl darani halaagtay, Alle na cidna ma dulmiyo ee dadku iyagaa naftooda dulmiya, camalka fiican ee layska abaal marin waxaa u shardi ah Alle rumeyn iyo xaq raacid, iyo toosnaan, haddii kale waxay noqon wax kama jiraan iyo luggooyo. **[Aali-Cimraan, 113-117]**

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تَتَّخِذُواْ بِطَانَةٗ مِّن دُونِكُمۡ لَا يَأۡلُونَكُمۡ خَبَالٗا وَدُّواْ مَا عَنِتُّمۡ قَدۡ بَدَتِ ٱلۡبَغۡضَآءُ مِنۡ أَفۡوَٰهِهِمۡ وَمَا تُخۡفِي صُدُورُهُمۡ أَكۡبَرُۚ قَدۡ بَيَّنَّا لَكُمُ ٱلۡأٓيَٰتِۖ إِن كُنتُمۡ تَعۡقِلُونَ ١١٨

118. Kuwa (xaqa) rumeeyow ha ka yeelannina saaxiib (hoose) wax idinka soo hadhay, kuma gabood falaan fasaadintiinna, waxayna jecel yihiin dhibkiinna, waxay ka muuqataa cadhadu afkooda, waxay qarsan laabahoodu yaa ka weyn, waan idiin caddaynay aayaadka haddaad wax kasaysaan.

هَـٰٓأَنتُمْ أُوْلَآءِ تُحِبُّونَهُمْ وَلَا يُحِبُّونَكُمْ
وَتُؤْمِنُونَ بِٱلْكِتَـٰبِ كُلِّهِۦ وَإِذَا
لَقُوكُمْ قَالُوٓاْ ءَامَنَّا وَإِذَا خَلَوْاْ عَضُّواْ
عَلَيْكُمُ ٱلْأَنَامِلَ مِنَ ٱلْغَيْظِ ۚ قُلْ
مُوتُواْ بِغَيْظِكُمْ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ عَلِيمٌۢ بِذَاتِ
ٱلصُّدُورِ ﴿١١٩﴾

119. Idinkani waad jeceshihiin, iyaguna idinma jecla, waxaadna rumeysaan kitaabka dhammaantiis, hadday idin la kulmaanna waxay dhahaan waannu rumeynay hadday kaliyoobaanna waxay idiin qaniinaan xubnaha (faraha) cadho darteed, waxaad dhahdaa ku dhinta cadhadiinna, Alle na waa og yahay waxa laabta ku sugan.

إِن تَمْسَسْكُمْ حَسَنَةٌ تَسُؤْهُمْ وَإِن
تُصِبْكُمْ سَيِّئَةٌ يَفْرَحُواْ بِهَا ۖ وَإِن
تَصْبِرُواْ وَتَتَّقُواْ لَا يَضُرُّكُمْ كَيْدُهُمْ
شَيْـًٔا ۗ إِنَّ ٱللَّهَ بِمَا يَعْمَلُونَ مُحِيطٌ ﴿١٢٠﴾

120. Hadday idin taabato wanaag way xumeysaa, hadday idinku dhacdo xumaanna way ku farxaan, haddaad samirtaan ood dhawrsataan idinkama dhibayso dhagartoodu waxba, Alle na waxay camal fali wuu koobay.

Alle sarreeye wuxuu uga digi mu'miniinta inay gaalada ka yeeshaan saaxiib gaar ahaaneed ooy sirtooda ku qarsadaan. Taasi ma habboona oo gaalo layskuma halleeyo, illeen waa col xumaan kula jecel, mararna ka sheega afkooda, inkastoo waxa laabta kaga jiraa ka weyn yahay, arrintaasna waa xaal Alle ogaysiiyey mu'miniinta hadday wax fahmi ooy waana qaadan. Ma aha inaan jeclaanno iyagoo ina neceb, oon rumeynay xaqa dhammaan iyaguna ka gaaloobeen, oyna khayaani mu'miniinta ooy wanaag u muujin markay isla joogaan, markay kali noqdaanna cadho faraha inoola qaniini, ha ku dhinteen cadho, wanaageennay ka nixi oo xumaanteenay ku farxi, haddaanse adkeysanno oon toosnaanno dhagartoodu waxba inama yeesho, illeen Alle ayaa koobay waxay qarsan ama camal fali oo xumaan ah. Waxaa la sheegay in Cumar binu Khadhaab lagu yidhi: waxaa jooga wiil gaal ah oo wax qora ee maad qoraa ka dhigatid markaasuu yidhi: ma waxaan ka dhigan saaxiib hoose (bidhaano). Waxaa ku dhacay muslimiinta oo dulli iyo kala tag ah waa markay gaalo saaxiib moodeen, iyaguna colloobeen oy qaybsameen, waase in laga baxo arrintaas. **[Aali-Cimraan, 118-120]**

وَإِذْ غَدَوْتَ مِنْ أَهْلِكَ تُبَوِّئُ ٱلْمُؤْمِنِينَ مَقَٰعِدَ لِلْقِتَالِ ۗ وَٱللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿١٢١﴾

121. (Xusuuso) markaad ka kallahday (tagtay) ehelkaaga adoo u yeeli mu'miniinta goob dagaal Alle na waa maqle og.

إِذْ هَمَّت طَّآئِفَتَانِ مِنكُمْ أَن تَفْشَلَا وَٱللَّهُ وَلِيُّهُمَا ۗ وَعَلَى ٱللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ ٱلْمُؤْمِنُونَ ﴿١٢٢﴾

122. Markay hammiday "doontay" labo kooxood oo idin ka mid ah inay fashilaan (cabsadaan) Alle na waligooda (gargaarahooda) ahaa. Ee Alle uun ha tala saarteen mu'miniintu.

وَلَقَدْ نَصَرَكُمُ ٱللَّهُ بِبَدْرٍ وَأَنتُمْ أَذِلَّةٌ ۖ فَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿١٢٣﴾

123. Dhab ahaan buu idiin ku gargaaray Alle (maalintii) badar idinkoo dullaysan "tabar yar", ee ka dhawrsada Alle waxaadna mudan tihiin inaad ku mahdisaan.

إِذْ تَقُولُ لِلْمُؤْمِنِينَ أَلَن يَكْفِيَكُمْ أَن يُمِدَّكُمْ رَبُّكُم بِثَلَٰثَةِ ءَالَٰفٍ مِّنَ ٱلْمَلَٰٓئِكَةِ مُنزَلِينَ ﴿١٢٤﴾

124. Markaad ku lahayd mu'miniinta miyuusan idinku fillayn inuu idinku xoojiyo Allihiin saddex kun oo malaa'ig ah oo soo degi.

بَلَىٰٓ إِن تَصْبِرُوا۟ وَتَتَّقُوا۟ وَيَأْتُوكُم مِّن فَوْرِهِمْ هَٰذَا يُمْدِدْكُمْ رَبُّكُم بِخَمْسَةِ ءَالَٰفٍ مِّنَ ٱلْمَلَٰٓئِكَةِ مُسَوِّمِينَ ﴿١٢٥﴾

125. Waa na kaafiyaan, ee haddaad samirtaan (adkeysataan) ood dhawrsataan, oy gaaladu degdeggoodaan idinku yimaadaan, Alle waa idinku xoojin shan kun oo malaa'ig ah oo calaamaysan.

وَمَا جَعَلَهُ ٱللَّهُ إِلَّا بُشْرَىٰ لَكُمْ وَلِتَطْمَئِنَّ قُلُوبُكُم بِهِۦ ۚ وَمَا ٱلنَّصْرُ إِلَّا مِنْ عِندِ ٱللَّهِ ٱلْعَزِيزِ ٱلْحَكِيمِ ﴿١٢٦﴾

126. Uma yeelin Alle (arrintaas) bishaaradiinna mooyee iyo inay ku xasisho quluubtiinnu isaga, gargaar aan Alle agtiisa ahayna ma jiro ee ah adkaade falsan.

لِيَقْطَعَ طَرَفًا مِّنَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓاْ أَوْ يَكْبِتَهُمْ فَيَنقَلِبُواْ خَآئِبِينَ ﴿١٢٧﴾

127. Si uu u gooyo (halaago) qayb ka mid ah kuwa gaaloobay ama walbahaariyo oy noqdaan iyagoo khasaaray.

Aayadahan wuxuu Alle kaga warrami dagaalladii uxud iyo badar oo tan hore ahayd bishii soonfur sanadkii saddexaad ee hijrada, uxudna waa buur weyn oo magaalada madiina xagga waqooyiga ka xigta, muslimiintana dhibaa ku gaadhay markay khilaafeen amarkii Nabiga qaarkood oo ka tageen halkay ilaalinayeen, markaas laga soo galay halkaa ilaa Nabiga laga dhaawacay dad badan oo asaxaabtii ahna ku shihiideen, taasina waxay ku tusin xumaanta is khilaafka iyo amarka fiican diidmadiisa waana waxay u waajibtay in laga digtoonaado. Tan kale waa dagaalkii badar ee weynaa ee Alle u gargaaray muslimiinta xoojiyeyna iyagoo tabar iyo tiraba yaraa, hase yeeshee Alle ayaa nasrigiisa iyo malaa'ig ugu gargaaray, taasina waxay ku tusin in Alle u gargaari muslimiinta markay dhab ahaan Alle u adeecaan sharcigiisana ku dhaqmaan, day sida loo jabiyey gaaladii qureesheed ee kibirka u soo duushay si ay xaqa u baabi'iyaan una waxyeelleeyaan muslimiinta. Badar waa magaalo u dhaw Madiino dagaalkuna wuxuu ahaa maalin jamce ah todobiyo tobanka bisha soon, sanadkii labaad ee hijrada, muslimiintu waxay ahaayeen saddex boqol iyo dhawr iyo toban gaaladuna ilaa kun. **[Aali-Cimraan, 121-127)**

لَيْسَ لَكَ مِنَ ٱلْأَمْرِ شَىْءٌ أَوْ يَتُوبَ عَلَيْهِمْ أَوْ يُعَذِّبَهُمْ فَإِنَّهُمْ ظَٰلِمُونَ ﴿١٢٨﴾

128. Waxba amarka kuma lihid Nabiyow ama wuu ka toobad aqbali Alle ama wuu cadaabi gaalada, illeen waa daalimiine.

وَلِلَّهِ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِى ٱلْأَرْضِ ۚ يَغْفِرُ لِمَن يَشَآءُ وَيُعَذِّبُ مَن يَشَآءُ ۚ وَٱللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٢٩﴾

129. Alle ayaa iska leh waxa samooyinka ku sugan iyo waxa dhulka ku sugan, wuxuu u dhaafaa (dambiga) cidduu doono, wuxuuna cadaabaa cidduu doono, Allana waa dambi dhaafe naxariista.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تَأْكُلُواْ ٱلرِّبَوٰٓاْ أَضْعَٰفًا مُّضَٰعَفَةً ۖ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿١٣٠﴾

130. Kuwa (xaqa) rumeeyow ha u cunina ribada laablaab, kana dhawrsada Alle waxaad mudan tihiin inaad liibaantaane.

وَٱتَّقُواْ ٱلنَّارَ ٱلَّتِىٓ أُعِدَّتْ لِلْكَٰفِرِينَ ﴿١٣١﴾

131. Kana dhawrsada naarta loo darbay gaalada.

وَأَطِيعُواْ ٱللَّهَ وَٱلرَّسُولَ لَعَلَّكُمۡ تُرۡحَمُونَ ١٣٢

132. Adeecana Alle iyo Rasuulka waxaad u dhawdihiin in laydiin naxariistee.

* وَسَارِعُوٓاْ إِلَىٰ مَغۡفِرَةٖ مِّن رَّبِّكُمۡ وَجَنَّةٍ عَرۡضُهَا ٱلسَّمَٰوَٰتُ وَٱلۡأَرۡضُ أُعِدَّتۡ لِلۡمُتَّقِينَ ١٣٣

133. Una deg daga dambi dhaafka allihiin iyo janno ballaadhkeedu yahay samaawaadka iyo dhulka oo loo darbay kuwa dhawrsada.

ٱلَّذِينَ يُنفِقُونَ فِي ٱلسَّرَّآءِ وَٱلضَّرَّآءِ وَٱلۡكَٰظِمِينَ ٱلۡغَيۡظَ وَٱلۡعَافِينَ عَنِ ٱلنَّاسِۗ وَٱللَّهُ يُحِبُّ ٱلۡمُحۡسِنِينَ ١٣٤

134. Ee ah kuwa wax bixiya waqtiga ladnaanta iyo dhibkaba, ee damiya cadhada ee iska cafiya dadka, Alle na waa jecel yahay samafalayaasha.

وَٱلَّذِينَ إِذَا فَعَلُواْ فَٰحِشَةً أَوۡ ظَلَمُوٓاْ أَنفُسَهُمۡ ذَكَرُواْ ٱللَّهَ فَٱسۡتَغۡفَرُواْ لِذُنُوبِهِمۡ وَمَن يَغۡفِرُ ٱلذُّنُوبَ إِلَّا ٱللَّهُ وَلَمۡ يُصِرُّواْ عَلَىٰ مَا فَعَلُواْ وَهُمۡ يَعۡلَمُونَ ١٣٥

135. Kuwa markay falaan xumaan ama dulmiyaan naftooda xusa Alle, warsadana dambi dhaafid dambigooda, wax dambi dhaafana ma jiro Alle mooyee, oon daa'imin (xumaantay) faleen iyagoona og.

أُوْلَٰٓئِكَ جَزَآؤُهُم مَّغۡفِرَةٞ مِّن رَّبِّهِمۡ وَجَنَّٰتٞ تَجۡرِي مِن تَحۡتِهَا ٱلۡأَنۡهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَاۚ وَنِعۡمَ أَجۡرُ ٱلۡعَٰمِلِينَ ١٣٦

136. Kuwaas abaalkoodu waa dambi dhaafka Rabbigood iyo jannooyin ay dureeri dhexdeeda wabiyaal iyagoo ku waari dhexdeeda, waxaa wanaagsan abaalka kuwa camal falay.

Gaaladu waxay ka jabiyeen Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) maalintii uxud dhoosha wayna dakhreen markaasaa dhiiggu dareeray markaasuu yidhi say u liibaani qoom ku falay Nabigooda waxaas isagoo xaqa u yeedhi, markaasay soo dagtay: waxba kuma lihid amarka, Allahaa ayaa ku shaqa leh oo ama ka toobad aqbali ama cadaabi kolley waa daalimiine, illeen isagaa xukunka caalamka iska lehe, taasina waxay ku tusin in jahaad iyo camal waajib tahay arrinta dhabteedase Alle ku shaqa leeyahay, wuxuu rabana fali, cidduu rabana u gargaari. Ribaduna waa xaaraan reebban ama ha yaraato ama ha badnaatee, saan soo sheegnay, waana in naar laga dhawrsadaa

Alle iyo Rasuulkiisana la adeeco loona dagdago dambi dhaaf iyo janno wayn oo loo darbay kuwa dhawrsaday, ee wax bixiya had walba, ee cadha damiya, cafiyana dadka, wanaaggana sameeya, Alle na xusa markay dambaabaan, dambi dhaafna Alle warsada, illeen waxaan Alle ahayn dambi ma dhaafee, oon xumaanta daa'imin, waxaana lagu abaal marin dambi dhaaf iyo jannooyin ay ku waari loona darbay kuwa camalka fiican. Sidaas darteed waa in wanaagga lagu dadaalo xumaantana laga fogaado. **[Aali-Cimraan, 128-136]**

قَدْ خَلَتْ مِن قَبْلِكُمْ سُنَنٌ فَسِيرُوا۟
فِى ٱلْأَرْضِ فَٱنظُرُوا۟ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ
ٱلْمُكَذِّبِينَ ﴿١٣٧﴾

137. Waxaa dhab ahaan u tagay hortiin sunnooyin (waddooyin) ee socda dhulka oo eega siday noqotay cidhibtii beeniyayaashii.

هَٰذَا بَيَانٌ لِّلنَّاسِ وَهُدًى وَمَوْعِظَةٌ
لِّلْمُتَّقِينَ ﴿١٣٨﴾

138. Kaasi waa caddayn dadka waana hanuun iyo waanada kuwa dhawrsada.

وَلَا تَهِنُوا۟ وَلَا تَحْزَنُوا۟ وَأَنتُمُ ٱلْأَعْلَوْنَ
إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ﴿١٣٩﴾

139. Ha tabar yaraannina hana murugoonnina idinkoo sarreeya haddaad tihiin mu'miniin.

إِن يَمْسَسْكُمْ قَرْحٌ فَقَدْ مَسَّ ٱلْقَوْمَ
قَرْحٌ مِّثْلُهُۥ ۚ وَتِلْكَ ٱلْأَيَّامُ نُدَاوِلُهَا
بَيْنَ ٱلنَّاسِ وَلِيَعْلَمَ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟
وَيَتَّخِذَ مِنكُمْ شُهَدَآءَ ۗ وَٱللَّهُ لَا يُحِبُّ
ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿١٤٠﴾

140. Hadduu idin taabtay dhib (dhaawac) dhab ahaan buu u taabtay qoomakan dhib la mid ah, waana sidaas adduunyadu, waxaanu ku kala wareejinnaa dadka dhexdiisa iyo in Alle ogaado oo muujiyo kuwa rumeeyey kana yeesho xaggiinna shuhado, Allana ma jecla daalimiinta.

وَلِيُمَحِّصَ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَيَمْحَقَ
ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿١٤١﴾

141. Iyo inuu imtixaamo kuwa rumeeyey tirtirana gaalada.

أَمْ حَسِبْتُمْ أَن تَدْخُلُوا۟ ٱلْجَنَّةَ وَلَمَّا
يَعْلَمِ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ جَٰهَدُوا۟ مِنكُمْ
وَيَعْلَمَ ٱلصَّٰبِرِينَ ﴿١٤٢﴾

142. Ma waxaad u maleyseen inaad galaysaan jannada iyadoon Alle ogaan, muujinninna kuwa jahaaday oo idinka mid ah oo uusan ogaannin, muujinninna kuwa samra.

143. Dhab ahaan waxaad u ahaydeen kuwa jecel geerida ka hor la kulankeeda, waadna aragteen geeridii idinkoo fiirin.

وَلَقَدْ كُنتُمْ تَمَنَّوْنَ ٱلْمَوْتَ مِن قَبْلِ أَن تَلْقَوْهُ فَقَدْ رَأَيْتُمُوهُ وَأَنتُمْ تَنظُرُونَ ﴿١٤٣﴾

Alle wuxuu u sheegay mu'miniinta dagaalkii uxud ka dib inuu imtixaankan oo kale u horreeyey ummadihii hore, quraankuna hanuun iyo waano yahay, in la cabsado oo la tabaryaraado ama la walbahaarana ayna habboonayn, maxaa yeelay waxaa guusha ku dambeyn mu'miniinta dhabta ah, hadduu dil iyo dhaawac idin taabtayna iyagaba wuu taabtay waana sidaas sunnada Alle inay marba ruux ku dhacdo masiibadu, waana imtixaan, mana suurowdo in janno la galo imtixaan la'aan, mana aha in jahaadka iyo ku shahiidkiisa la jeclaado marka gaalada lala kulmana la cabsado. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: ha jeclaannina la kulanka colka, ee warsada Alle caafimaad, markaad la kulantaanna adkaysta oo ogaada in jannadu tahay hooska seefaha hoostiisa (saxiix). **[Aali-Cimraan, 137-143]**

144. "Nabi" Muxamadna ma aha waxaan Rasuul ahayn, waxaa tagey hortiis rasuullo, ee hadduu dhinto ama la dilo ma waxaad u gaddoomaysaan cidhibtiinnii (dib), ruuxii u gaddooma cidhibtiisii (gaalooba) kama dhibo Alle waxba, wuuna abaal marin kuwa ku shukriya.

وَمَا مُحَمَّدٌ إِلَّا رَسُولٌ قَدْ خَلَتْ مِن قَبْلِهِ ٱلرُّسُلُ ۚ أَفَإِيْن مَّاتَ أَوْ قُتِلَ ٱنقَلَبْتُمْ عَلَىٰٓ أَعْقَٰبِكُمْ ۚ وَمَن يَنقَلِبْ عَلَىٰ عَقِبَيْهِ فَلَن يَضُرَّ ٱللَّهَ شَيْـًٔا ۗ وَسَيَجْزِى ٱللَّهُ ٱلشَّٰكِرِينَ ﴿١٤٤﴾

145. Nafna ma aha tii dhimata idanka Alle la'aantiis, waa kitaab muddeysan, ruuxii doona abaalka adduunyo waxbaan ka siineynaa, ruuxii doona abaalka aakhirana waxbaan ka siinnaa, waxaanna abaal marin kuwa shukriya.

وَمَا كَانَ لِنَفْسٍ أَن تَمُوتَ إِلَّا بِإِذْنِ ٱللَّهِ كِتَٰبًا مُّؤَجَّلًا ۗ وَمَن يُرِدْ ثَوَابَ ٱلدُّنْيَا نُؤْتِهِۦ مِنْهَا وَمَن يُرِدْ ثَوَابَ ٱلْءَاخِرَةِ نُؤْتِهِۦ مِنْهَا ۚ وَسَنَجْزِى ٱلشَّٰكِرِينَ ﴿١٤٥﴾

146. Badanaa Nabi ay ka garab dagaallameen culimo badani, oyna cabsannin wax ku dhacay jidka Alle dartiis, tabarna yareynin, dulloobinna, Allana waa jecel yahay kuwa samra.

وَكَأَيِّن مِّن نَّبِيٍّ قَٰتَلَ مَعَهُۥ رِبِّيُّونَ كَثِيرٌ فَمَا وَهَنُوا۟ لِمَآ أَصَابَهُمْ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ وَمَا ضَعُفُوا۟ وَمَا ٱسْتَكَانُوا۟ ۗ وَٱللَّهُ يُحِبُّ ٱلصَّٰبِرِينَ ﴿١٤٦﴾

وَمَا كَانَ قَوْلَهُمْ إِلَّآ أَن قَالُوا۟ رَبَّنَا ٱغْفِرْ لَنَا ذُنُوبَنَا وَإِسْرَافَنَا فِىٓ أَمْرِنَا وَثَبِّتْ أَقْدَامَنَا وَٱنصُرْنَا عَلَى ٱلْقَوْمِ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿١٤٧﴾

147. Mana aha hadalkoodu waxaan ahayn Rabbiyow noo dhaaf dambigannaga iyo xadgudubkannaga amarkannaga, sugna gomadahannaga noogana gargaar qoomka gaalada ah.

فَـَٔاتَىٰهُمُ ٱللَّهُ ثَوَابَ ٱلدُّنْيَا وَحُسْنَ ثَوَابِ ٱلْـَٔاخِرَةِ ۗ وَٱللَّهُ يُحِبُّ ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿١٤٨﴾

148. Markaasuu siiyey Alle abaalka adduunyo iyo wanaagga abaalka aakhiro, Allana wuxuu jecel yahay samafalayaasha.

Maalintii uxud markuu dhib gaadhay muslimiinta yaa lagu dhawaaqay in la dilay Nabigi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) waxaana jirtay in la dhaawacay, markaasay naxeen oo walbahaareen muslimiintii markaasay soo dagtay aayaddu. Cid walbana way dhiman waxaase hadhi Alle, Nabiyadii horana waa kuwii dhintay, waxaase loo baahan yahay adkaysi iyo samir iyo doonid abaalmarinta Alle ee wanaagsan, ee ma bannaana in la shakiyo ama la walbahaaro oo la tabar yareeyo.

Aayaddana waxaa akhriyey Abuubakar maalintii Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) geeriyooday, markuu u yimid Cumaroo dadka la hadli, oo leh car waa ruuxii sheega in Nabigii dhintay, markaasuu Abuubakar khudbad akhriyey isagoo leh: ruuxii "Nabi" Muxamed caabudayayoow Muxamed wuu dhintay, ruuxii Alle caabudayeyna Alle waa nool yahay mana dhimanayo. Taasina waxay ku tusin fadliga Abuubakar iyo xaq ku sugnaantiisa, saasaana looga baahan yahay mu'minka inuu xaqa ku sugnaado had iyo jeer iyo si walba. **[Aali-Cimraan, 144-148]**

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ إِن تُطِيعُوا۟ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ يَرُدُّوكُمْ عَلَىٰٓ أَعْقَـٰبِكُمْ فَتَنقَلِبُوا۟ خَـٰسِرِينَ ﴿١٤٩﴾

149. Kuwa xaqa rumeeyow haddaad addeecdaan (maqashaan) kuwa gaaloobay waxay idiin celin cidhibtiinna, markaasaad noqonaysaan idinkoo khasaaray.

بَلِ ٱللَّهُ مَوْلَىٰكُمْ ۖ وَهُوَ خَيْرُ ٱلنَّـٰصِرِينَ ﴿١٥٠﴾

150. Alle ayaase gargaarihiinna ah, isagaana ugu khayrroon gargaare.

151. Waxaan ku tuuraynaa quluubta kuwa gaaloobay argagax la wadaajintooda Alle waxaan loo soo dejinnin xujo darteed, hoygooduna waa naar, iyadaana u xun xerada daalimiinta.

سَنُلْقِي فِي قُلُوبِ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ ٱلرُّعْبَ بِمَآ أَشْرَكُواْ بِٱللَّهِ مَا لَمْ يُنَزِّلْ بِهِۦ سُلْطَٰنًا ۖ وَمَأْوَىٰهُمُ ٱلنَّارُ ۖ وَبِئْسَ مَثْوَى ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿١٥١﴾

152. Dhab ahaan yuu idiinku rumeeyey Alle yaboohiisii markaad ku dhammayneyseen (ku dilayseen) idamkiisa, intaad ka cabsataan ood ku murantaan amarka ood caasidaan intuu idin tusiyey waxaad jeceshihiin ka dib, waxaa idinka mid ah ruux dooni adduunyo, waxaana idinka mid ah ruux dooni aakhiro, markaas idinka iilay xaggooda si uu idiin imtixaano, dhab ahaanna wuu idiin cafiyey, Allena wuu ku fadli leeyahay mu'miniinta.

وَلَقَدْ صَدَقَكُمُ ٱللَّهُ وَعْدَهُۥٓ إِذْ تَحُسُّونَهُم بِإِذْنِهِۦ ۖ حَتَّىٰٓ إِذَا فَشِلْتُمْ وَتَنَٰزَعْتُمْ فِي ٱلْأَمْرِ وَعَصَيْتُم مِّنۢ بَعْدِ مَآ أَرَىٰكُم مَّا تُحِبُّونَ ۚ مِنكُم مَّن يُرِيدُ ٱلدُّنْيَا وَمِنكُم مَّن يُرِيدُ ٱلْءَاخِرَةَ ۚ ثُمَّ صَرَفَكُمْ عَنْهُمْ لِيَبْتَلِيَكُمْ ۖ وَلَقَدْ عَفَا عَنكُمْ ۗ وَٱللَّهُ ذُو فَضْلٍ عَلَى ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٥٢﴾

153. Markaad carareyseen, oo aydaan milicsanayn cidna, Rasuulkuna idiinka yeedhi gadaashiinna oo idinku dhacay murug la jirto murug (kale) si aydaan ugu walbahaarin wixii idin ka tagay iyo wixii idinku dhacay, Allana waa og yahay waxaad falaysaan.

* إِذْ تُصْعِدُونَ وَلَا تَلْوُۥنَ عَلَىٰٓ أَحَدٍ وَٱلرَّسُولُ يَدْعُوكُمْ فِيٓ أُخْرَىٰكُمْ فَأَثَٰبَكُمْ غَمًّۢا بِغَمٍّ لِّكَيْلَا تَحْزَنُواْ عَلَىٰ مَا فَاتَكُمْ وَلَا مَآ أَصَابَكُمْ ۗ وَٱللَّهُ خَبِيرٌۢ بِمَا تَعْمَلُونَ ﴿١٥٣﴾

Qisada dagaalkii uxud aad bay aayaduhu uga warrameen, waxayna si fiican u tilmaameen xaalkii muslimiinta iyo say u xanuunsadeen markay koox ka mid ah oo ilaalinaysay colka khilaaftay amarkii Rasuulka, lagana cararay Rasuulkii isagoo ugu yeedhi inay soo joogsadaan. Tan kale war gaal waa inaan la maqlin oon la adeecin illeen waa khasaare. Waxaa sugnaatay in Rasuulku (naxariis

iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ku yidhi Cabdullahi binu Jubayr iyo kooxdiisii: halkan haka tagina, xataa haddaad aragtaan anagoo nala jabiyey ha noo kaalmeynina, markey muslimiintu reeyeen yaa kooxdii ka tagtay halkeedii ninkii madaxda u ahaa iyo wax yar mooyee, markaasay gaaladii soo hareereeyeen muslimiintii. Taasina waxay ku tusin wanaagga isku duubnida muslimiinta iyo xumaanta is khilaafka. Ruuxii doona inuu si fiican u siyaad sado arrintan ha akhriyo kutubta siirada iyo tafsiirrada wax badan buu ka heliye. **[Aali-Cimraan, 149-153]**

ثُمَّ أَنزَلَ عَلَيْكُم مِّنۢ بَعْدِ ٱلْغَمِّ أَمَنَةً
نُّعَاسًا يَغْشَىٰ طَآئِفَةً مِّنكُمْ ۖ وَطَآئِفَةٌ
قَدْ أَهَمَّتْهُمْ أَنفُسُهُمْ يَظُنُّونَ بِٱللَّهِ
غَيْرَ ٱلْحَقِّ ظَنَّ ٱلْجَٰهِلِيَّةِ ۖ يَقُولُونَ
هَل لَّنَا مِنَ ٱلْأَمْرِ مِن شَىْءٍ ۗ قُلْ إِنَّ
ٱلْأَمْرَ كُلَّهُۥ لِلَّهِ ۗ يُخْفُونَ فِىٓ أَنفُسِهِم
مَّا لَا يُبْدُونَ لَكَ ۖ يَقُولُونَ لَوْ كَانَ لَنَا
مِنَ ٱلْأَمْرِ شَىْءٌ مَّا قُتِلْنَا هَٰهُنَا ۗ قُل لَّوْ
كُنتُمْ فِى بُيُوتِكُمْ لَبَرَزَ ٱلَّذِينَ كُتِبَ
عَلَيْهِمُ ٱلْقَتْلُ إِلَىٰ مَضَاجِعِهِمْ ۖ وَلِيَبْتَلِىَ
ٱللَّهُ مَا فِى صُدُورِكُمْ وَلِيُمَحِّصَ
مَا فِى قُلُوبِكُمْ ۚ وَٱللَّهُ عَلِيمٌۢ بِذَاتِ
ٱلصُّدُورِ ﴿١٥٤﴾

154. Markaas uu ku soo dejiyey korkiinna murug ka dib amni, lulmo daboolaysa koox idinka mid ah, kooxna waxaa walaacisay naftooda waxayna u malayn Alle male jaahiliyeed waxayna dhihi ma wax baan ku leennahay amarka, waxaad dhahdaa amarka dhammantiis Alle ayaa iska leh, waxayna ku qarin naftooda waxayna kuu muujinayn iyagoo dhihi: haddaan amarka wax ku leennahay nalaguma dileen halkan, waxaad dhahdaa haddaad tihiin guryihiinna (kuwa jooga) way u soo bixi lahaayeen kuwa loo qoray geerida halkay seexan (lagu dili), (saasna wuxuu u falay Alle) inuu imtixaano Alle waxa laabtiinna ku sugan iyo inuu kala shaandheeyo waxa quluubtiinna ku sugan, Allana waa og yahay waxa laabta ku sugan.

إِنَّ ٱلَّذِينَ تَوَلَّوْا۟ مِنكُمْ يَوْمَ ٱلْتَقَى
ٱلْجَمْعَانِ إِنَّمَا ٱسْتَزَلَّهُمُ ٱلشَّيْطَٰنُ

155. Kuwii jeedsaday oo idinka mid ah maalintay kulmeen labadii col waxaa uun simbiriirixiyey

بِبَعْضِ مَا كَسَبُوا۟ ۖ وَلَقَدْ عَفَا ٱللَّهُ عَنْهُمْ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ حَلِيمٌ ﴿١٥٥﴾

shaydaan waxay kasbadeen sababtiisa qaarkood, wuuna iska cafiyey Alle xaggooda, Allena waa dambi dhaafe dul badan.

Alle wuu ku mannaysan addoomadiisa wuxuu ku soo dajiyey mu'miniinta uxud oo lulmo ah murug ka dib, sidoo kale xasillooni, taasina waxay ku tusin sugnaan iyo ku kalsoonida Alle, Ibnu Mascuud waxaa laga wariyey: lulmadu dagaalka waxay ka timid Alle, salaaddana shaydaan. (Waxaa sheegay Ibnu abii Xaatim). Munafiqiintuse waxay la joogeen qas iyo calaacal iyo ma amaraa gacanta noogu jira, xaalka Alle ayaa iska leh dhammaantiis. Cidddii dagaalka ku dhimatana kolley way u soo bixi lahaayeen halkay ku dhinteen, hase yeeshee wuxuu Alle saas u falay imtixaan dartiis, iyo inay caddaadaan kuwa simbiriirixday oo shaydaan waswaasiyey. Saas darteed waa Alle in lagu kalsoonaado, wax fiicanna laga malaysto, walaacin iyo murageyn mu'miniintana layska jiraa illeen isagaa wax walba awoodee. Muslimiintii hore qaarkood waxay dhihi jireen; wanaagga abaalkiisu waa in wanaag lagu wafajiyo, xumaanta abaalkeeduna waa in xumaan kale lagu dhoco. Runtii qisada uxud waa imtixaan cad. **[Aali-Cimraan, 154-155]**

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تَكُونُوا۟ كَٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَقَالُوا۟ لِإِخْوَٰنِهِمْ إِذَا ضَرَبُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ أَوْ كَانُوا۟ غُزًّى لَّوْ كَانُوا۟ عِندَنَا مَا مَاتُوا۟ وَمَا قُتِلُوا۟ لِيَجْعَلَ ٱللَّهُ ذَٰلِكَ حَسْرَةً فِى قُلُوبِهِمْ ۗ وَٱللَّهُ يُحْىِۦ وَيُمِيتُ ۗ وَٱللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿١٥٦﴾

156. Kuwa (xaqa) rumeeyow ha noqonina sida kuwa gaaloobay oo ku yidhi walaalahood markay ku safraan dhulka ama duulaan hadday agtanada joogaan ma dhinteen lamana dileen si uu uga yeelo arrintaas qoomammo quluubtooda, Alle na waxbuu nooleeyaa, waxna waa dilaa, Alle na waxaad camal falaysaan wuu arkaa.

وَلَئِن قُتِلْتُمْ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ أَوْ مُتُّمْ لَمَغْفِرَةٌ مِّنَ ٱللَّهِ وَرَحْمَةٌ خَيْرٌ مِّمَّا يَجْمَعُونَ ﴿١٥٧﴾

157. Haddii laydinku dilo jidka Alle amaad dhimataan dambi dhaaf Alle iyo naxariistiisa yaa idiinka khayr badan waxay kulmin.

وَلَئِن مُّتُّمْ أَوْ قُتِلْتُمْ لَإِلَى ٱللَّهِ تُحْشَرُونَ ﴿١٥٨﴾

158. Haddaad dhimataan ama laydin dilo xagga Alle umbaa laydiin celin.

فَبِمَا رَحْمَةٍ مِّنَ ٱللَّهِ لِنتَ لَهُمْ ۖ وَلَوْ كُنتَ فَظًّا غَلِيظَ ٱلْقَلْبِ لَٱنفَضُّوا۟ مِنْ حَوْلِكَ ۖ فَٱعْفُ عَنْهُمْ وَٱسْتَغْفِرْ لَهُمْ وَشَاوِرْهُمْ فِى ٱلْأَمْرِ ۖ فَإِذَا عَزَمْتَ فَتَوَكَّلْ عَلَى ٱللَّهِ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ يُحِبُّ ٱلْمُتَوَكِّلِينَ ﴿١٥٩﴾

159. Naxariista Alle darteed yaad ugu jilicday haddaadse tahay mid ingagan oo qalbi adag way kaa kala tagi lahaayeen gaararkaada, ee iska cafi una dambi dhaaf warso kalana tasho amarka, markaas haddaad wax goosatana talo saaro Alle (ku dhaqaaq), Alle wuxuu jecel yahay kuwa tala saartee.

إِن يَنصُرْكُمُ ٱللَّهُ فَلَا غَالِبَ لَكُمْ ۖ وَإِن يَخْذُلْكُمْ فَمَن ذَا ٱلَّذِى يَنصُرُكُم مِّنۢ بَعْدِهِۦ ۗ وَعَلَى ٱللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ ٱلْمُؤْمِنُونَ ﴿١٦٠﴾

160. Hadduu idiin gargaaro Alle wax idinka adkaan ma jiro hadduu idin hoojiyana waa kuma kan idiin gargaari gadaashiis, Alle uun ha talasaarteen mu'miniintu.

Rasuulka Muxamed ah (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu Alle ugu deeqay dabeeco fiican, saas darteed yey mu'miniintu ugu soo kulmeen, hadduuse kakan yahay way ka ag carari lahaayeen, saasuuna Alle u faray inuu iska cafiyo wixii dhib ah ee kaga yimaada mu'miniinta, una dambi dhaaf warsado, lana tashado, marka arrin la goostana lagu tallaabsado isagoo la talo saaran Alle, gargaarna Allaa iska leh, hadduu muslimiinta u gargaaro wax ka adkaan ma jiro, haddii kalena yaa Alle ka soo hadhay oo gargaara ah. Mu'miniintuna waa inayna noqonnin sida gaalada oo ciddii meel ku soo dhimata ama jahaad ku shahiidda ku dhihin hadday nala joogi lahaayeen mayna dhinteen, taasina waa qoomammo la yeelay quluubtooda, Alle ayaase waxna nooleeya waxna dila, si kastood u dhimatana Allaa lagu hor keeni, waxaase ka khayr roon waxa la kulmin oo adduunya ah in lagu shahiido jidka Alle si dambi dhaaf iyo naxariis Alle loo helo. **[Aali-Cimraan, 156-160]**

وَمَا كَانَ لِنَبِىٍّ أَن يَغُلَّ ۚ وَمَن يَغْلُلْ يَأْتِ بِمَا غَلَّ يَوْمَ ٱلْقِيَـٰمَةِ ۚ ثُمَّ تُوَفَّىٰ كُلُّ نَفْسٍ مَّا كَسَبَتْ وَهُمْ لَا يُظْلَمُونَ ﴿١٦١﴾

161. Kama suurowdo Nabi inuu ganiimo wax ka khayaamo, ruuxii ganiimo wax ka khayaama wuu la imaan wuxuu khayaamay maalinta qiyaame, markaas waxaa loo oofin (dhammayn) nafkasta waxay kasbatay lagamana dulmiyo.

أَفَمَنِ ٱتَّبَعَ رِضْوَٰنَ ٱللَّهِ كَمَنۢ بَآءَ بِسَخَطٍ مِّنَ ٱللَّهِ وَمَأْوَىٰهُ جَهَنَّمُ ۖ وَبِئْسَ ٱلْمَصِيرُ ﴿١٦٢﴾

162. Ruux raacay raalli ahaanshaha Alle ma la mid baa ruux la noqday cadho Alle hoygiisuna yahay jahannamo iyadaana u xun meel loo noqdo.

هُمْ دَرَجَٰتٌ عِندَ ٱللَّهِ ۗ وَٱللَّهُ بَصِيرٌۢ بِمَا يَعْمَلُونَ ﴿١٦٣﴾

163. Iyagu waa darajaad Alle agtiisa, Allana waa arkaa waxay fali.

لَقَدْ مَنَّ ٱللَّهُ عَلَى ٱلْمُؤْمِنِينَ إِذْ بَعَثَ فِيهِمْ رَسُولًا مِّنْ أَنفُسِهِمْ يَتْلُوا۟ عَلَيْهِمْ ءَايَٰتِهِۦ وَيُزَكِّيهِمْ وَيُعَلِّمُهُمُ ٱلْكِتَٰبَ وَٱلْحِكْمَةَ وَإِن كَانُوا۟ مِن قَبْلُ لَفِى ضَلَٰلٍ مُّبِينٍ ﴿١٦٤﴾

164. Dhab ahaan buu ugu mannaystay Alle mu'mininta markuu ka bixiyey dhexdooda rasuul naftooda ka mid ah kuna akhriyi korkooda aayaadkiisa daahirinna barina kitaabka (quraanka) iyo xigmada (sunnada Nabiga) waxayna ahaayeen horay baadi cad.

Khayaamada iyo dhagartu waa ka reebban tahay ruuxa muslimka ah ama ha ahaato waxa gaalada laga helo ama waxa kale, khayaamadana wuu keeni qiyaamada saaxiibkeed isagoo xambaarsan, cid walbana waxay la kulmi qiyaamada waxay kasbatay dulmina ma jiro. Ruux raacay xaqa Alle la mid ma aha mid cadho Alle ku dhacday oo gali naar, dadkuna waa darajaad oo iskuma qasna, Allana waa arkaa, mu'miniintuna wuxuu Alle ku mannaystay soo bixinta Rasuulka Muxamed ah (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) iyagoo yaqaannay runtiisa, aamminnimadiisa iyo wanaaggiisaba, kuna akhriyi quraanka, iyo sunnada Nabiga iyagoo horay baadi u ahaa. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: yaanan garan midkiinoo imaan qiyaamada isagoo xambaarsan rati qayliyi markaa uu dhihi: Muxamedow! Muxamedow! Oon dhihi: waxba kaagamo hanto Alle waan ku gaadhsiiyey (waa dheer yahay...). Waxaana soo arooray wax badan oo ka digi xumaanta khiyaamada iyo cunidda xaq darro ee xoola kale, haddaadse iska khayaanto ciddaad aragto, ood iska cunto waxaad la kulanto, oodan waxba u aaba yeelin, taasi ma lslaambaa, muslinnimaduna waa toosnaan, Alle ka yaabid, xaq raacid, xalaal cunid, wanaag u yeedhid, xumaan ka reebid iyo ku dhaqan dhab ah diinta islaamka. **[Aali-Cimraan, 161-164]**

أَوَلَمَّآ أَصَٰبَتْكُم مُّصِيبَةٌ قَدْ أَصَبْتُم مِّثْلَيْهَا قُلْتُمْ أَنَّىٰ هَٰذَا ۖ قُلْ

165. Hadday idin asiibtay (idinku dhacday) dhibaato aad asiibteen laba jibbaarkeed (badar) waxaad

dhahdeen: xaggee nooga yimid (dhibku) waxaad dhahdaa agta naftiinna, Alle na wax kasta wuu karaa.

هُوَ مِنْ عِندِ أَنفُسِكُمْ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿١٦٥﴾

166. Waxa idinku dhacay maalintay kulmeen labadii kooxood waa idamka Alle iyo inuu ogaado oo muujiyo mu'miniinta.

وَمَآ أَصَٰبَكُمْ يَوْمَ ٱلْتَقَى ٱلْجَمْعَانِ فَبِإِذْنِ ٱللَّهِ وَلِيَعْلَمَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٦٦﴾

167. Iyo inuu ogaado oo muujiyo kuwa munaafaqoobay, oo loo yidhi kaalay ku dirira jidka Alle ama difaaca, waxayna dheheen: haddaan ognahay dagaal waan idin raaci lahayn, iyagu gaalnimaday maalintaas uga dhaw yihiin rumeyn, waxay ka odhan afkooda waxaan ahayn quluubtooda, Alle na waa og yahay waxay qarin.

وَلِيَعْلَمَ ٱلَّذِينَ نَافَقُوا۟ ۚ وَقِيلَ لَهُمْ تَعَالَوْا۟ قَٰتِلُوا۟ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ أَوِ ٱدْفَعُوا۟ ۖ قَالُوا۟ لَوْ نَعْلَمُ قِتَالًا لَّٱتَّبَعْنَٰكُمْ ۗ هُمْ لِلْكُفْرِ يَوْمَئِذٍ أَقْرَبُ مِنْهُمْ لِلْإِيمَٰنِ ۚ يَقُولُونَ بِأَفْوَٰهِهِم مَّا لَيْسَ فِى قُلُوبِهِمْ ۚ وَٱللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا يَكْتُمُونَ ﴿١٦٧﴾

168. Waa kuwa ku yidhi walaalahood (munaafiqiintu) iyagoo iska fadhiistay hadday na adeecaan lama dileen, waxaad dhahdaa ka dhawra naftiinna geeri haddaad run sheegaysaan.

ٱلَّذِينَ قَالُوا۟ لِإِخْوَٰنِهِمْ وَقَعَدُوا۟ لَوْ أَطَاعُونَا مَا قُتِلُوا۟ ۗ قُلْ فَٱدْرَءُوا۟ عَنْ أَنفُسِكُمُ ٱلْمَوْتَ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿١٦٨﴾

Hadday muslimiintu qaadan waayeen dhibkii maalintii uxud iyaba waxay dileen ama qabteen maalintii badar labo jibaadh, xaalkuna wuxuu ku dhacay idam Alle iyo ogaanshihiis iyo inay kala muuqdaan mu'miniinta dhabta ah iyo munaafiqiinta, waxaana dhacday in munaafiqiintii iska soo noqotay iyadoo uu hoggaamin munaafaqii Cabdullahi binu Ubayi binu Salool iyagoo sheegey inayna muuqan waxay u dagaallamaan, muslimiintuna ku lahayd war kaalaya dirira ama badiya muuqaalka, saasay ku tageen iyagoo sheegi inaan la laayeen kuwii jahaadka lagu dilay haddii warkooda la maqlo. Ha ka celiyeen naftooda geerida hadday run sheegi, taasina waa caadada munaafiqiinta calaacala. **[Aali-Cimraan, 165-168]**

169. Hana u malaynina kuwa lagu dilay jidka Alle kuwa dhintay, saas ma aha waxay ku nool yihiin Allahood agtiisa laguna arzaaqi.

وَلَا تَحْسَبَنَّ ٱلَّذِينَ قُتِلُوا۟ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ أَمْوَٰتًۢا ۚ بَلْ أَحْيَآءٌ عِندَ رَبِّهِمْ يُرْزَقُونَ ﴿١٦٩﴾

170. Iyagoo ku faraxsan wuxuu siiyey Alle oo fadligiisa ah, kuna bishaaraysan kuwaan wali haleelin ee gadaashooda ah inuusan korkooda cabsi iyo murugo midna ahayn.

فَرِحِينَ بِمَآ ءَاتَىٰهُمُ ٱللَّهُ مِن فَضْلِهِۦ وَيَسْتَبْشِرُونَ بِٱلَّذِينَ لَمْ يَلْحَقُوا۟ بِهِم مِّنْ خَلْفِهِمْ أَلَّا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿١٧٠﴾

171. Waxayna ku bishaaraystaan nicmo Alle iyo fadli iyo inaan Alle dayacayn ajriga mu'miniinta.

* يَسْتَبْشِرُونَ بِنِعْمَةٍ مِّنَ ٱللَّهِ وَفَضْلٍ وَأَنَّ ٱللَّهَ لَا يُضِيعُ أَجْرَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٧١﴾

172. Ee ah kuwa ajiibay (maqlay) Alle iyo rasuulka ka dib intuu asiibay dhaawac kuwa wanaag falay oo ka mid ah oo dhawrsaday waxaa u sugnaaday ajir wayn.

ٱلَّذِينَ ٱسْتَجَابُوا۟ لِلَّهِ وَٱلرَّسُولِ مِنۢ بَعْدِ مَآ أَصَابَهُمُ ٱلْقَرْحُ ۚ لِلَّذِينَ أَحْسَنُوا۟ مِنْهُمْ وَٱتَّقَوْا۟ أَجْرٌ عَظِيمٌ ﴿١٧٢﴾

173. Ee ah kuwuu yidhi dadku (gaaladu) dadkii baa idiin kulmay ee ka cabsada oo u siyaadiyey rumeyn, oy dhaheen kaafiyahannagu waa Ilaahay isagaana u fiican wakiil.

ٱلَّذِينَ قَالَ لَهُمُ ٱلنَّاسُ إِنَّ ٱلنَّاسَ قَدْ جَمَعُوا۟ لَكُمْ فَٱخْشَوْهُمْ فَزَادَهُمْ إِيمَٰنًا وَقَالُوا۟ حَسْبُنَا ٱللَّهُ وَنِعْمَ ٱلْوَكِيلُ ﴿١٧٣﴾

174. Oo la noqday nicmo Alle iyo fadli oyna taaban xumaan raacayna raalli ahaanshaha Alle, ilaahayna waa fadli wayn lahaade.

فَٱنقَلَبُوا۟ بِنِعْمَةٍ مِّنَ ٱللَّهِ وَفَضْلٍ لَّمْ يَمْسَسْهُمْ سُوٓءٌ وَٱتَّبَعُوا۟ رِضْوَٰنَ ٱللَّهِ ۗ وَٱللَّهُ ذُو فَضْلٍ عَظِيمٍ ﴿١٧٤﴾

175. Kaasi waa shaydaan wuxuuna idinku cabsi galin awliyadiisa (saaxiibadiis) ee ha cabsanina, ee iga cabsada haddaad mu'miniin tihiin.

إِنَّمَا ذَٰلِكُمُ ٱلشَّيْطَٰنُ يُخَوِّفُ أَوْلِيَآءَهُۥ فَلَا تَخَافُوهُمْ وَخَافُونِ إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ﴿١٧٥﴾

Ciddii shahiid lagu dilo wuxuu ku nool yahay Alle agtiisa isagoo farxi oo bishaaraysan jecelna in saaxiibadiisu soo shihiidaan, bishaaro, nicmo iyo ajir yaana u sugnaaday, waana kuwa Alle iyo Rasuulka adeeca inta dhib ku dhacay ka dib. Una adkeystay markii loo kulmay Alle na cuskaday, lana noqday wanaag iyo rille Alle oon kana cabsannin warka shaydaanka ee Alle ka cabsaday. Fadliga shahiidnimada iyo jihaadka waxaa ku soo arooray wax badan, waxaa ka mid ah: inay arwaaxdoodu ku jirto shimbiro daaqi jannada oo u dheelmada tiriigyo carshiga ku xidhan. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: waxaa na kaafiya Alle isagaa u fiican wakiil, waxaa yidhi Nabi Ibraahim markii dabka lagu tuuray iyo Nabi Muxamed markii lagu yidhi dadkiibaa idiin kulmay. Waxaa fadliga jahaadka iyo wanaaggiisa rumeeya kuwa jidka Alle ee xaqa ah ku jahaada. **[Aali-Cimraan, 169-175]**

وَلَا يَحۡزُنكَ ٱلَّذِينَ يُسَٰرِعُونَ فِي ٱلۡكُفۡرِۚ إِنَّهُمۡ لَن يَضُرُّواْ ٱللَّهَ شَيۡـٔٗاۗ يُرِيدُ ٱللَّهُ أَلَّا يَجۡعَلَ لَهُمۡ حَظّٗا فِي ٱلۡأٓخِرَةِۖ وَلَهُمۡ عَذَابٌ عَظِيمٌ ١٧٦

176. Yeyna ku murug galin kuwa u deg degi gaalnimada iyagu kama dhibaan Alle waxba, wuxuu dooni Alle inuusan ugu yeelin nasiib aakhiree, waxayna mudan cadaab weyn.

إِنَّ ٱلَّذِينَ ٱشۡتَرَوُاْ ٱلۡكُفۡرَ بِٱلۡإِيمَٰنِ لَن يَضُرُّواْ ٱللَّهَ شَيۡـٔٗاۖ وَلَهُمۡ عَذَابٌ أَلِيمٞ ١٧٧

177. Kuwa ku gatay gaalnimo iimaanka kama dhibayaan Alle waxba waxayna mudan cadaab daran.

وَلَا يَحۡسَبَنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓاْ أَنَّمَا نُمۡلِي لَهُمۡ خَيۡرٞ لِّأَنفُسِهِمۡۚ إِنَّمَا نُمۡلِي لَهُمۡ لِيَزۡدَادُوٓاْ إِثۡمٗاۚ وَلَهُمۡ عَذَابٞ مُّهِينٞ ١٧٨

178. Yeyna u malaynin kuwa gaaloobay inuu sugidoodu khayr u tahay, waxaannu u sugi uun inay siyaadsadaan dambi, waxayna mudan cadaab dulleeya.

مَّا كَانَ ٱللَّهُ لِيَذَرَ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ عَلَىٰ مَآ أَنتُمۡ عَلَيۡهِ حَتَّىٰ يَمِيزَ ٱلۡخَبِيثَ مِنَ ٱلطَّيِّبِۗ وَمَا كَانَ ٱللَّهُ لِيُطۡلِعَكُمۡ عَلَى ٱلۡغَيۡبِ وَلَٰكِنَّ ٱللَّهَ يَجۡتَبِي مِن رُّسُلِهِۦ مَن يَشَآءُۖ فَـَٔامِنُواْ بِٱللَّهِ وَرُسُلِهِۦۚ وَإِن تُؤۡمِنُواْ وَتَتَّقُواْ فَلَكُمۡ أَجۡرٌ عَظِيمٞ ١٧٩

179. Ma aha Alle kii kaga taga mu'miniinta sidaad tihiin intuu ka kala sooco ka xun iyo kan fiican, mana aha Alle kii idin daaliciya (tusiya) waxa maqan, hase yeeshee wuxuu ka dooran rasuulladiisa ciddduu doono, ee rumeeya Alle iyo rasuulladiisa,

haddaad rumeysaan xaqa oo dhawrsataan waxaad mudanaysaan ajir weyn.

180. Yeyna u malaynin kuwa ku bakhayli wuxuu siiyey Alle oo fadli ah inay khayr u tahay, shar bayse u tahay, waxaana luqunta loo galin waxay ku bakhaylayeen maalinta qiyaame, Alle ayaana iska leh dhaxalka samaawaadka iyo dhulka, Alle na waxaad camal falaysaan waa og yahay.

وَلَا يَحْسَبَنَّ ٱلَّذِينَ يَبْخَلُونَ بِمَآ ءَاتَىٰهُمُ ٱللَّهُ مِن فَضْلِهِۦ هُوَ خَيْرًا لَّهُم ۖ بَلْ هُوَ شَرٌّ لَّهُمْ ۖ سَيُطَوَّقُونَ مَا بَخِلُوا۟ بِهِۦ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ ۗ وَلِلَّهِ مِيرَٰثُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۗ وَٱللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرٌ ﴿١٨٠﴾

Cid gaaloowday waxba ha u murgin, waxba Alle kama dhibtee, aakhirana nasiib kuma leh, illeen gaalnimay iimaanka ka doorteene, sugidduna khayr uma aha ee waa dambi badsasho. Adduunkuna waa imtixaan si loo kala sooco kan xun iyo kan fiican, wax og waxa maqanna ma jiro Alle mooyee, wuxuu u doortay rasuulladiisa cidduu doonay, waase in xaqa la rumeeyo lana dhawrsado, ku bakhayl xaqana khayr ma aha ee waa khasaare, qiyaamana wuxuu imaan isagoo luqunta ku wada wuxuu ku bakhaylay, Alle ayaana u hadhi waxa cirka iyo dhulka ku sugan waxa la falina og ee ha loo darbado. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: addoonkaan gudan zakada xoolihiisa waxaa laga dhigaa mas bara leh oo raaci oo ka carari oo raaci isagoo dhihi: waxaan ahay kansigaagii, markaasuu aayaddan akhriyey Cabdullahi. Waxaa wariyey Imaam Axmed iyo kuwo kale. Xaqoo la sheegi waayana way noqotaa. **[Aali-Cimraan, 176-180]**

181. Dhab ahaan yuu u maqlay Alle hadalka kuwii yidhi Alle waa faqiir anaguna waxaan nahay hodan (waa yuhuud ha halaagmeene). Waan qoraynaa waxay dhihi iyo diliddooda Nabiyada ee xaq darro waxaan u dhahaynaa dhadhamiya cadaabka gubashada.

لَّقَدْ سَمِعَ ٱللَّهُ قَوْلَ ٱلَّذِينَ قَالُوٓا۟ إِنَّ ٱللَّهَ فَقِيرٌ وَنَحْنُ أَغْنِيَآءُ ۘ سَنَكْتُبُ مَا قَالُوا۟ وَقَتْلَهُمُ ٱلْأَنۢبِيَآءَ بِغَيْرِ حَقٍّ وَنَقُولُ ذُوقُوا۟ عَذَابَ ٱلْحَرِيقِ ﴿١٨١﴾

182. Taasina waa waxay hormarsatay gacmahoodu Alle na ma aha dulmiyaha addoomada.

ذَٰلِكَ بِمَا قَدَّمَتْ أَيْدِيكُمْ وَأَنَّ ٱللَّهَ لَيْسَ بِظَلَّٰمٍ لِّلْعَبِيدِ ﴿١٨٢﴾

183. Waa kuwa yidhi Alle wuxuu nagula ballantamay inaannaan rumeyn rasuul intuu nooga keeno qurbaan (sadaqo) oy cunto naar, waxaad dhahdaa waxay idiinla yimaadeen rasuullo hortay xujooyin iyo waxaad sheegteen ee maxaad u disheen haddaad run sheegaysaan.

ٱلَّذِينَ قَالُوٓاْ إِنَّ ٱللَّهَ عَهِدَ إِلَيْنَآ أَلَّا نُؤْمِنَ لِرَسُولٍ حَتَّىٰ يَأْتِيَنَا بِقُرْبَانٍ تَأْكُلُهُ ٱلنَّارُ ۗ قُلْ قَدْ جَآءَكُمْ رُسُلٌ مِّن قَبْلِى بِٱلْبَيِّنَٰتِ وَبِٱلَّذِى قُلْتُمْ فَلِمَ قَتَلْتُمُوهُمْ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿١٨٣﴾

184. Hadday ku beeniyaan waxaa dhab ahaan loo beeniyey rasuullo kaa horreeyey oo la yimid xujooyin iyo kutub iyo kitaab cad.

فَإِن كَذَّبُوكَ فَقَدْ كُذِّبَ رُسُلٌ مِّن قَبْلِكَ جَآءُو بِٱلْبَيِّنَٰتِ وَٱلزُّبُرِ وَٱلْكِتَٰبِ ٱلْمُنِيرِ ﴿١٨٤﴾

Yuhuud iyo wixii la mid ah (Alle ha dulleeyo) waa af xun yihiin had iyo jeer intay kaga sheegaan Alle inuu faqiir yahay iyaguna hodan yihiin markay maqleen aayadaha sadaqada ku boorrin waase laga abaal marin hadalkaas, oo la cadaabi waxay hor marsadeen darteed, waana beentood in lagula ballamay inaanay rumeynin rasuul intay sadaqadiisu naaru ka cunto, immisaay rasuullo dileen xujooyinna beeniyeen. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: markay soo dagtay: yaa Alle amaah fiican amaahiya (wax sadaqaysta) yey yuhuudu tidhi: Muxamadow wuu baahday Allehaa intuu ka warsado addoomada amaah, markaasay soo degtay jawaab ahaan aayadda (waa maqlay Alle kuwii hadalkaa yidhi Alle waa faqiir annaguna waxaannu nahay hodan). Alle ayaa hodan ah wax walbana isagaa awooda dadkuna waa u baahan yihiin, waxa la bixiyaa dadkay wax u tartaa ee ilaahay uma baahna, ee waa in laga digtoonaado waddada gaalada waxna dar Alle loo baxsado si dadka baahan loo kaalmeeyo. **[Aali-Cimraan, 181-184]**

185. Naf kasta waxay dhadhamin geeri, waxaa uun laydiin oofin ajrigiinna maalinta qiyaame, ruuxiise laga iilo naarta oo la galiyo janada wuu liibaanay, nolosha adduunna ma aha waxaan raaxo kado ahayn.

كُلُّ نَفْسٍ ذَآئِقَةُ ٱلْمَوْتِ ۗ وَإِنَّمَا تُوَفَّوْنَ أُجُورَكُمْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ ۖ فَمَن زُحْزِحَ عَنِ ٱلنَّارِ وَأُدْخِلَ ٱلْجَنَّةَ فَقَدْ فَازَ ۗ وَمَا ٱلْحَيَوٰةُ ٱلدُّنْيَآ إِلَّا مَتَٰعُ ٱلْغُرُورِ ﴿١٨٥﴾

186. Waan idinku imtixaamaynaa xoolihiinna iyo naftiinna waxaadna ka maqlaysaan kuwa la siiyey kitaabka oo idinka horreeyey iyo mushrikiinta (gaaladii carbeed) dhib badan haddaadse samirtaan ood dhawrsataan arrintaasu waa umuuraha loo qasdo.

* لَتُبْلَوُنَّ فِيٓ أَمْوَٰلِكُمْ وَأَنفُسِكُمْ وَلَتَسْمَعُنَّ مِنَ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْكِتَٰبَ مِن قَبْلِكُمْ وَمِنَ ٱلَّذِينَ أَشْرَكُوٓا۟ أَذًى كَثِيرًا ۚ وَإِن تَصْبِرُوا۟ وَتَتَّقُوا۟ فَإِنَّ ذَٰلِكَ مِنْ عَزْمِ ٱلْأُمُورِ ﴿١٨٦﴾

187. (Xusuuso) markuu qaaday Alle ballanka kuwii la siiyey kitaabka inaad u caddaysaan (xaqa) dadka oydaan qarinnin waxayse ka tuureen dhabarkooda gadaashiis waxayna ku gateen lacag yar waxaa xun waxay gadan.

وَإِذْ أَخَذَ ٱللَّهُ مِيثَٰقَ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْكِتَٰبَ لَتُبَيِّنُنَّهُۥ لِلنَّاسِ وَلَا تَكْتُمُونَهُۥ فَنَبَذُوهُ وَرَآءَ ظُهُورِهِمْ وَٱشْتَرَوْا۟ بِهِۦ ثَمَنًا قَلِيلًا ۖ فَبِئْسَ مَا يَشْتَرُونَ ﴿١٨٧﴾

188. Haw maleyn kuwa ku farxa waxay la yimaadaan oo jecel in lagu mahdiyo waxayna falin haw malayn inay ka nabadgali cadaabka, waxaana u sugnaaday cadaab daran.

لَا تَحْسَبَنَّ ٱلَّذِينَ يَفْرَحُونَ بِمَآ أَتَوا۟ وَّيُحِبُّونَ أَن يُحْمَدُوا۟ بِمَا لَمْ يَفْعَلُوا۟ فَلَا تَحْسَبَنَّهُم بِمَفَازَةٍ مِّنَ ٱلْعَذَابِ ۖ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١٨٨﴾

189. Alle ayaa iska leh xukunka samaawaadka iyo dhulka, Alle ayaana wax kasta kara.

وَلِلَّهِ مُلْكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۗ وَٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿١٨٩﴾

Naf walba way dhiman waana la abaalmarin qiyaamada, liibaan waa janno la galo iyo naar laga nabadgalo, xoolo iyo naftana waa laysku imtixaami, gaaladana had iyo jeer dhibaa laga maqlaa waxayse u baahan tahay adkaysi iyo dhawrsasho. Tan kale waa waajib in xaqa loo caddeeyo dadka oon laga qarinin, ciddiise xaqa tuurta oo wax kale oon qiima lahayn ku badalata jecelna in waxay sameeyaan iyo waxayna sameeyninba lagu ammaano kuwaasu ma aha kuwo liibaani oo naar ka kori illeen Alle ayaa xukunka iska leh wax walbana karee, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Alle Ayaan ku dhaartaye adduunku ma aha marka aakhiro loo eego midkiin oo farta badda galiyey oo ka soo celiyey mooyee. (Muslim). Tan kale waa in

dadka wax loo sheego lagana qarinnin. Nabiguna wuxuu yidhi: ruuxii cilmi la warsado oo qariya waxaa lagu xakamayn qiyaamada xakama naar ah. (Abuu Daawuud, Ibnu Maajah). **[Aali-Cimraan, 185-189]**

إِنَّ فِي خَلْقِ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَٱخْتِلَٰفِ ٱلَّيْلِ وَٱلنَّهَارِ لَءَايَٰتٍ لِّأُو۟لِى ٱلْأَلْبَٰبِ ﴿١٩٠﴾

190. Abuuridda samaawaadka iyo dhulka iyo is khilaafidda habeenka iyo maalinta calaamooyin yaa ugu sugan kuwa caqliga leh.

ٱلَّذِينَ يَذْكُرُونَ ٱللَّهَ قِيَٰمًا وَقُعُودًا وَعَلَىٰ جُنُوبِهِمْ وَيَتَفَكَّرُونَ فِى خَلْقِ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ رَبَّنَا مَا خَلَقْتَ هَٰذَا بَٰطِلًا سُبْحَٰنَكَ فَقِنَا عَذَابَ ٱلنَّارِ ﴿١٩١﴾

191. Ee ah kuwa ku xusa Alle taagni iyo fadhi iyo jiifba, oo ku fikira abuuridda samaawaadka iyo dhulka (iyagoo dhihi) Allow umaadan abuurin kan (khalqiga) baadil (ciyaar) waad nasahan tahay ee naga kori cadaabka naarta.

رَبَّنَآ إِنَّكَ مَن تُدْخِلِ ٱلنَّارَ فَقَدْ أَخْزَيْتَهُۥ ۖ وَمَا لِلظَّٰلِمِينَ مِنْ أَنصَارٍ ﴿١٩٢﴾

192. Allow adigu ruuxaad galiso naarta dhab ahaan baad u dullaysay daalimiintana uma sugnaannin gargaarayaal.

رَّبَّنَآ إِنَّنَا سَمِعْنَا مُنَادِيًا يُنَادِى لِلْإِيمَٰنِ أَنْ ءَامِنُوا۟ بِرَبِّكُمْ فَـَٔامَنَّا ۚ رَبَّنَا فَٱغْفِرْ لَنَا ذُنُوبَنَا وَكَفِّرْ عَنَّا سَيِّـَٔاتِنَا وَتَوَفَّنَا مَعَ ٱلْأَبْرَارِ ﴿١٩٣﴾

193. Allow annagu waxaan maqallay yeedhe u yeedhi iimaanka oo dhihi rumeeya Allihiin waana rumeynay, Rabbigeenow noo dhaaf dambiyadannada asturna xumaantannada naguna dil la jirka kuwa baarriga ah (fiican).

رَبَّنَا وَءَاتِنَا مَا وَعَدتَّنَا عَلَىٰ رُسُلِكَ وَلَا تُخْزِنَا يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ ۗ إِنَّكَ لَا تُخْلِفُ ٱلْمِيعَادَ ﴿١٩٤﴾

194. Rabbigeenow na sii waxaad noogu yaboohday rasuulladaada (carrabbadooda) hana na dulleyn maalinta qiyaame, adigu ma baajisid ballane.

Eegidda cirka iyo dhulka, habeenka iyo maalinta waxaa ugu sugan muuminiinta caqliga leh calaamadda awoodda Alle iyo jiriddiisa, kuwaas had iyo jeer Alle xusa ogna inaan Alle ciyaar u abuurin adduunka, kana magan gala Alle

naarta, mar hadday xaqa rumeeyeen iyo inaan Alle dulleyn maalintaas. Cirka iyo dhulka, iyo khalqiga kalaba waa in la eego laguna waano qaato, dibna wax looga fikiraa, xadiith dheer waxaa ku sugnaaday in Bilaal u yimid Nabigoo ooyi markaas uu yidhi maxaa kaa oohin, Nabiguna yidhi: magacaa be' maxaan la ooyi waayi waxaaba laygu soo dajiyey xalay aayaddan (abuuridda samooyinka, dhulka iyo is khilaafidda habeenka iyo maalinta calaamad baa ugu sugan kuwa caqliga leh) wuxuuna yidhi: waxaa halaagsamay ciddii akhrida oo fikirin. Waxaa wariyey Ibnu Xibbaan.

Xasan al-basrina wuxuu yidhi: fikirku waa muraayadda ku tusin wanaagaada iyo xumaantaada. Sidaas darteed waa in had iyo jeer la fikiraa lana xisaabtamaa, Alle na lagu xidhnaado wanaag adduun iyo aakhirana lagu dadaalaa. **[Aali-Cimraan, 190-194]**

فَٱسْتَجَابَ لَهُمْ رَبُّهُمْ أَنِّى لَآ أُضِيعُ
عَمَلَ عَٰمِلٍ مِّنكُم مِّن ذَكَرٍ أَوْ أُنثَىٰ ۖ
بَعْضُكُم مِّنۢ بَعْضٍ ۖ فَٱلَّذِينَ هَاجَرُوا۟
وَأُخْرِجُوا۟ مِن دِيَٰرِهِمْ وَأُوذُوا۟ فِى سَبِيلِى
وَقَٰتَلُوا۟ وَقُتِلُوا۟ لَأُكَفِّرَنَّ عَنْهُمْ
سَيِّـَٔاتِهِمْ وَلَأُدْخِلَنَّهُمْ جَنَّٰتٍ تَجْرِى
مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ ثَوَابًا مِّنْ عِندِ ٱللَّهِ ۗ
وَٱللَّهُ عِندَهُۥ حُسْنُ ٱلثَّوَابِ ﴿١٩٥﴾

195. Wuxuu ku ajiibay Rabbigood anugu ma dayaco camal mid camal falay oo idinka mid ah lab iyo dhaddig, qaarkiin qaarbuu ka ahaaday kuwa hijrooday ee laga bixiyey guryahooda oo lagu dhibay jidkayga oo dagaallamay oo la dilay waannu asturi xumaanahooda waxaanna galin jannooyiin ay dureeri dhexdeeda wabiyaal waana abaal marin Alle xaggiisa ah, Alle agtiisaana abaalmarin wanaagsan tahay.

لَا يَغُرَّنَّكَ تَقَلُّبُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ فِى
ٱلْبِلَٰدِ ﴿١٩٦﴾

196. Yeyna ku kedin ku gadgaddoonka kuwa gaaloobay ee dhulka (adduunka).

مَتَٰعٌ قَلِيلٌ ثُمَّ مَأْوَىٰهُمْ جَهَنَّمُ ۚ وَبِئْسَ
ٱلْمِهَادُ ﴿١٩٧﴾

197. Waa raaxo yar kadib hoygoodu waa jahannamo, iyadaana u xun gogol.

لَٰكِنِ ٱلَّذِينَ ٱتَّقَوْا۟ رَبَّهُمْ لَهُمْ جَنَّٰتٌ
تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ خَٰلِدِينَ
فِيهَا نُزُلًا مِّنْ عِندِ ٱللَّهِ ۗ

198. Hase yeeshee kuwa ka dhawrsada Allahood waxay mudan jannooyin ay dureeri dhexdeeda wabiyaal iyagoo ku

وَمَا عِندَ ٱللَّهِ خَيۡرٞ لِّلۡأَبۡرَارِ ١٩٨

waari dhexdeeda, waa marti qaad xagga Alle ka ahaaday, waxa Alle agtiisa ah yaana u khayr roon kuwa baarriga ah (wanaagsan).

وَإِنَّ مِنۡ أَهۡلِ ٱلۡكِتَٰبِ لَمَن يُؤۡمِنُ بِٱللَّهِ وَمَآ أُنزِلَ إِلَيۡكُمۡ وَمَآ أُنزِلَ إِلَيۡهِمۡ خَٰشِعِينَ لِلَّهِ لَا يَشۡتَرُونَ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ ثَمَنٗا قَلِيلًاۚ أُوْلَٰٓئِكَ لَهُمۡ أَجۡرُهُمۡ عِندَ رَبِّهِمۡۗ إِنَّ ٱللَّهَ سَرِيعُ ٱلۡحِسَابِ ١٩٩

199. Ehelu kitaabka waxaa ka mid ah mid rumeyn Alle iyo waxa laydiin soo dejiyey iyo wixii loo soo dejiyey iyagoo u khushuuci Alle kumana gataan aayaadka Alle qiimo yar, kuwaas waxaa u sugnaaday ajrigooda Allahood agtiis, Allana waa deg degtaa xisaabtiisu.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱصۡبِرُواْ وَصَابِرُواْ وَرَابِطُواْ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ لَعَلَّكُمۡ تُفۡلِحُونَ ٢٠٠

200. Kuwa (xaqa) rumeeyow samra oo samirtama kuna nagaada dhawridda (xuduudda islaamka) kana dhawrsada Alle waxaad mudan tihiin inaad liibaantaane.

Alle ma dayaco camal ruux lab iyo dhadigba, kuwa dar Alle u hijrooda ee guryahooda laga bixiyey ee lagu dhibo jidka Alle oo dagaallama oo la dilo Alle wuxuu ku abaalmarin dambi dhaaf iyo janno. Mana aha in lagu dhagramo gagadoonka gaalada iyo shaqadooda adduunyo; kanay sameeyeen oo meel heblay gaadheen iyo waxaasay soo saareen, illeen waa wax yar oo naaru uga dambayso. Kan Alle ka dhawrsadaase khayrbaa u yaal Alle agtiisa, ehelu kitaabkana waxaa ka mid ah kuwo xaqa rumeeyey Alle ayaana abaal marin, tan kale waa in la adkaysto lana jahaado islaamkana la ilaaliyo si loo liibaano, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: ku nagaadi jidka Alle maalin yaa ka khayr badan adduunka iyo waxa ku sugan korkiisa. (Bukhaari). Taasina waxay ku tusin fadliga jahaadka jidka Alle iyo daaficidda xuduudda islaamka iyo adkeysiga arrintaas yey liibaantu tahay sidaas. Mar kalana Rasuulku (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: laba indhood ma taabato naari il u ooyday cabsi Alle iyo il bariday iyadoo ilaalin jidka Alle. (Tirmadi). Waana kaas sharafta jahaad, muslimiintuna waxaa xoog, sharaf iyo cisi ugu dambeysay markay ka tageen jahaadka iyo difaaca xuduudda lslaamka. **[Aali-Cimraan, 195-200]**

Suurat An-Nisaa'

سُورَةُ ٱلنِّسَآءِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ ٱتَّقُواْ رَبَّكُمُ ٱلَّذِى
خَلَقَكُم مِّن نَّفْسٍ وَٰحِدَةٍ وَخَلَقَ
مِنْهَا زَوْجَهَا وَبَثَّ مِنْهُمَا رِجَالًا كَثِيرًا
وَنِسَآءً ۚ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ ٱلَّذِى تَسَآءَلُونَ
بِهِۦ وَٱلْأَرْحَامَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَلَيْكُمْ
رَقِيبًا ﴿١﴾

1. Dadow ka dhawrsada Allihiinna idinka abuuray naf kaliya (Aadam) kana abuuray xaggeeda haweenaydeeda (Xaawo) kana abuuray xaggooda rag badan iyo haweenba, ka dhawrsada Allihiinna aad wax isku warsataan iyo qaraabada, Alle na wuxuu u yahay korkiinna ilaaliye.

وَءَاتُواْ ٱلْيَتَٰمَىٰٓ أَمْوَٰلَهُمْ ۖ وَلَا تَتَبَدَّلُواْ
ٱلْخَبِيثَ بِٱلطَّيِّبِ ۖ وَلَا تَأْكُلُوٓاْ
أَمْوَٰلَهُمْ إِلَىٰٓ أَمْوَٰلِكُمْ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ حُوبًا
كَبِيرًا ﴿٢﴾

2. Siiya agoonta xoolahooda hana ku baddalina xumaan wanaag, hana cunina xoolahooda la jirka xoolihiinna, taasina waa dambi weyn.

وَإِنْ خِفْتُمْ أَلَّا تُقْسِطُواْ فِى ٱلْيَتَٰمَىٰ
فَٱنكِحُواْ مَا طَابَ لَكُم مِّنَ ٱلنِّسَآءِ
مَثْنَىٰ وَثُلَٰثَ وَرُبَٰعَ ۖ فَإِنْ خِفْتُمْ أَلَّا
تَعْدِلُواْ فَوَٰحِدَةً أَوْ مَا مَلَكَتْ أَيْمَٰنُكُمْ ۚ
ذَٰلِكَ أَدْنَىٰٓ أَلَّا تَعُولُواْ ﴿٣﴾

3. Haddaad ka cabsataan inaydaan ku cadaalad falin agoonta guursada wixii idiin wanaagsan oo haween ah, labo, saddex iyo afar, haddaad ka cabsataan inaydaan caddaalad falin mid kaliya (guursada) ama waxay hanatay gacmihiinnu, saasaa u dhaw inaydaan jawr faline.

وَءَاتُواْ ٱلنِّسَآءَ صَدُقَٰتِهِنَّ نِحۡلَةٗۚ فَإِن
طِبۡنَ لَكُمۡ عَن شَيۡءٖ مِّنۡهُ نَفۡسٗا فَكُلُوهُ
هَنِيٓـٔٗا مَّرِيٓـٔٗا ٤

4. Siiya haweenka meherkooda isagoo waajib ah hadday idiinka raali noqoto wax ka mid ah naftoodu cuna idinkoo shifaysan oo kadban.

Suuraddu waa suurad weyn oo daryeeli xaqa haweenka iyo agoonta iyo kuwa kale waxayna fari in Alle laga dhawrsado illeen waa kan naf kaliya dadka ka abuuraye, taasoo ah Nabi Aadam, waxaa kaloo beenaalayaashu ka sheegi abuurka dadka waa waxaan jirin, sidoo kale waxay fartay dhawridda xaqa qaraabaada, agoonta, guurka oo lagu caddaalad falo haddaan la karayna mid kaliya la guursado, iyo in haweenka la siiyo meherkooda waxay ka raalli noqdaan mooyee, diinta lslaamkuna wax badan bay ka digtay dhibka agoonta iyo haweenka, waxaa sugnaaday: u caabud Alle sidii adoo arka, haddaadan arkin isagaa ku arkee. (Bukhari iyo Muslim). Sidaas darteed waa in la dhawraa xuquuqda dadka gaar ahaan agoonta oon la cunin xoolahooda loona wanaag falo, iyo haweenka oo la siiyo xaqooda iyo maherkooda lana dulmiyin. **[An-Nisaa': 1-4]**

وَلَا تُؤۡتُواْ ٱلسُّفَهَآءَ أَمۡوَٰلَكُمُ ٱلَّتِي
جَعَلَ ٱللَّهُ لَكُمۡ قِيَٰمٗا وَٱرۡزُقُوهُمۡ
فِيهَا وَٱكۡسُوهُمۡ وَقُولُواْ لَهُمۡ قَوۡلٗا
مَّعۡرُوفٗا ٥

5. Ha siinnina sufahada (aan is maamuli karin) xoolihiinna Alle idiinka yeelay tu noloshiinnu ku taagan tahay, ka quudiya kana arrad bixiya una dhaha hadal fiican.

وَٱبۡتَلُواْ ٱلۡيَتَٰمَىٰ حَتَّىٰٓ إِذَا بَلَغُواْ
ٱلنِّكَاحَ فَإِنۡ ءَانَسۡتُم مِّنۡهُمۡ رُشۡدٗا
فَٱدۡفَعُوٓاْ إِلَيۡهِمۡ أَمۡوَٰلَهُمۡۖ وَلَا تَأۡكُلُوهَآ
إِسۡرَافٗا وَبِدَارًا أَن يَكۡبَرُواْۚ وَمَن كَانَ
غَنِيّٗا فَلۡيَسۡتَعۡفِفۡۖ وَمَن كَانَ فَقِيرٗا
فَلۡيَأۡكُلۡ بِٱلۡمَعۡرُوفِۚ فَإِذَا دَفَعۡتُمۡ إِلَيۡهِمۡ
أَمۡوَٰلَهُمۡ فَأَشۡهِدُواْ عَلَيۡهِمۡۚ وَكَفَىٰ بِٱللَّهِ
حَسِيبٗا ٦

6. Imtixaamana agoonta markay gaadhaan guur, haddaad ku aragtaan (ogaataan) xil kasnimo siiya iyaga xoolahooda hana u cunina xad gudub iyo ka degdagis intayna weynaan, ruuxii hodan ah ha dhawrsado ruuxii faqiir ahna ha ka cuno si wanaagsan, markaad u dhiibtaan xoolahooda marag u yeela, waana ku filan yahay Alle xisaabiye.

لِّلرِّجَالِ نَصِيبٌ مِّمَّا تَرَكَ ٱلْوَٰلِدَانِ وَٱلْأَقْرَبُونَ وَلِلنِّسَآءِ نَصِيبٌ مِّمَّا تَرَكَ ٱلْوَٰلِدَانِ وَٱلْأَقْرَبُونَ مِمَّا قَلَّ مِنْهُ أَوْ كَثُرَ ۚ نَصِيبًا مَّفْرُوضًا ﴿٧﴾

7. Ragga waxaa u sugnaaday qayb ka mid ah waxay ka tageen labada waalid iyo qaraabadu, haweenkana waxaa u sugnaaday qayb ka mid ah waxay ka tageen labada waalid iyo qaraabadu kiisa yar iyo kiisa badanba, isagoo ah qaddar la waajibiyey.

Dadka muslimka ah waa mid kaliya, waana inay is dhaqaaleeyaan, ciddii xoolo leh oon is maamuli karin waa in gacanta loogu hayaa, laguna dhaqaaleeyaa, lana imtixaamo markay qaangaadhaan hadday maamuli karaanna loo dhiibo, oon loona cunin xadgudub iyo ka deg degid weynaansho, ruuxii hodan ah ha dhawrsado, kii faqiir ahna ha ka cuno si dhawrid ah, marka xoolaha la siinna marag ha loo yeelo isagoo Alle xisaabiye ku filan yahay. Rag iyo haween mid kastaa qaybuu ku leeyahay waxay ka tagaan waalidkood, ama qaraabadii yaraa iyo badnaaba, waa qader xukuman.

Waxaa sugnaatay in nin u yimid Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuuna ku yidhi: waxaan hayaa agoon xoola leh anna xoolo ma lihi ee wax ma ka cunaa, wuxuuna ku yidhi: ka cun si fiican oon xad gudub ahayn. Taasina waxay ku tusin dhawridda xuquuqda dadka tabarta yar, iyo ilalinta arrimahooda, iyo inaan lagu xad gudbin. **[An-Nisaa': 5-7]**

وَإِذَا حَضَرَ ٱلْقِسْمَةَ أُو۟لُوا۟ ٱلْقُرْبَىٰ وَٱلْيَتَٰمَىٰ وَٱلْمَسَٰكِينُ فَٱرْزُقُوهُم مِّنْهُ وَقُولُوا۟ لَهُمْ قَوْلًا مَّعْرُوفًا ﴿٨﴾

8. Hadday qaybinta joogaan qaraabo, agoon iyo masaakiin (aan dhaxlayn) wax ka siiya una dhaha hadal wanaagsan.

وَلْيَخْشَ ٱلَّذِينَ لَوْ تَرَكُوا۟ مِنْ خَلْفِهِمْ ذُرِّيَّةً ضِعَٰفًا خَافُوا۟ عَلَيْهِمْ فَلْيَتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَلْيَقُولُوا۟ قَوْلًا سَدِيدًا ﴿٩﴾

9. Hana ka cabsadeen Allaah kuwa hadday kaga tagaan gadaashooda caruur tabar yar cabsan lahaa, hana ka dhawrsadeen Alle hana dheheen hadal toosan.

إِنَّ ٱلَّذِينَ يَأْكُلُونَ أَمْوَٰلَ ٱلْيَتَٰمَىٰ ظُلْمًا إِنَّمَا يَأْكُلُونَ فِى بُطُونِهِمْ نَارًا ۖ وَسَيَصْلَوْنَ سَعِيرًا ﴿١٠﴾

10. Kuwa u cunaya xoolaha agoonta dulmi (xaq darro) waxay uun ku cunayaan calooshooda naar waxayna gali saciiro.

يُوصِيكُمُ ٱللَّهُ فِيٓ أَوۡلَٰدِكُمۡۖ لِلذَّكَرِ مِثۡلُ
حَظِّ ٱلۡأُنثَيَيۡنِۚ فَإِن كُنَّ نِسَآءٗ فَوۡقَ
ٱثۡنَتَيۡنِ فَلَهُنَّ ثُلُثَا مَا تَرَكَۖ وَإِن كَانَتۡ
وَٰحِدَةٗ فَلَهَا ٱلنِّصۡفُۚ وَلِأَبَوَيۡهِ لِكُلِّ
وَٰحِدٖ مِّنۡهُمَا ٱلسُّدُسُ مِمَّا تَرَكَ إِن كَانَ
لَهُۥ وَلَدٞۚ فَإِن لَّمۡ يَكُن لَّهُۥ وَلَدٞ وَوَرِثَهُۥٓ
أَبَوَاهُ فَلِأُمِّهِ ٱلثُّلُثُۚ فَإِن كَانَ لَهُۥٓ إِخۡوَةٞ
فَلِأُمِّهِ ٱلسُّدُسُۚ مِنۢ بَعۡدِ وَصِيَّةٖ يُوصِي
بِهَآ أَوۡ دَيۡنٍۗ ءَابَآؤُكُمۡ وَأَبۡنَآؤُكُمۡ
لَا تَدۡرُونَ أَيُّهُمۡ أَقۡرَبُ لَكُمۡ نَفۡعٗاۚ
فَرِيضَةٗ مِّنَ ٱللَّهِۗ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَلِيمًا
حَكِيمٗا ١١

11. Wuxuu idiin dardaarmi Alle caruurtiinna; kan lab wuxuu mudan yahay qaybta labo dhadig oo kale, hadday yihiin haween ka sarreeya labo waxay mudan saddex meelood laba meel wuxuu ka tagay, hadday tahay mid waxay mudan nus, labada waalidna mid kastoo ka mid ah wuxuu mudan sudus (lix meelood meel) hadduu ka dhintay (ilmahoodu) caruur, hadduu caruur lahayn oy dhaxlayaan labada waalid hooyadu waxay mudan saddex meelood meel, hadduu walaalo leeyahay hooyadu waxay mudan sudus, dardaaranka iyo daynta ka dib, aabayaalkiinna iyo wiilashana ma ogidin kooda idinku dhaw nacfi, waa faralyeel "qaddaraad" Alle, ilaahayna waa oge falsan.

Aayadda hore waxay fari in hadday qaybta joogaan dad aan dhaxalka lahayn oo qaraabo, agoon iyo masaakiin ah wax laga siiyo, tan kalana in la dhaqaaleeyo caruurta tabar yar sidaad u jeceshahay in haddaad ka tagto iyagoo kale loo dhaqaaleeyo, iyo inaan la cunin xoolaha agoonta ciddi cuntana waxay cuni naar, aayadda dambana waxay caddaysay dhaxalka waxayna ka mid tahay saddexda aayadood ee suuraddan ku sugan ee ka warramay dhaxalka, barashada dhaxalkana waxaa ku soo arooray isku boorrin, sida: cilmigu waa saddex waxa ka soo hadhay waa siyaado: aayad sugan, sunno taagan, ama fariido caadil ah, waxaa kaloo soo aroortay: barta faraa'isha barana dadka waa cilmiga nuskiiye, waana la halmaami, waana waxa ugu horreeya ee laga siibi umaddayda. (Labada xadiith ba ma xoog badna). Saasaana loo caddeeyey oo loo muujiyey. **[An-Nisaa': 8-11].**

12. Waxaa idiin sugnaaday nus waxay ka tagaan haweenkiinnu haddayna ilmo lahayn, haddayse la haayeen ilmo waxaad leedihiin rubuc (afar meelood meel) waxay ka tagaan dardaaran ay dardaarmeen iyo dayn ka dib, haweenkuna waxay mudan rubuc (afar meelood meel) waxaad ka tagteen haddaydaan ilmo lahayn, haddaad ilmo leedihiin waxay mudan thumun (siddeed meelood meel) waxaad ka tagtaan, dardaaran aad dardaarmaysaan iyo dayn ka dib, hadduu yahay ninku mid la dhaxli waalid iyo ilmo la'aan ama haweenaydu isagoo leh walaal ama walaashiis mid kasta wuxuu mudan sudus (lix meelood meel hadday la hooya yihiin) hadday yihiin wax ka badan intaas waxay wadaagi thuluth (saddex meelood meel) dardaaran la dardaarmo iyo dayn ka dib, isagoon dardaaranka cidna lagu dhibayn, waana dardaaran Alle, Ilaahayna waa oge dulsan.

* وَلَكُمْ نِصْفُ مَا تَرَكَ أَزْوَاجُكُمْ
إِن لَّمْ يَكُن لَّهُنَّ وَلَدٌ ۚ فَإِن كَانَ لَهُنَّ
وَلَدٌ فَلَكُمُ ٱلرُّبُعُ مِمَّا تَرَكْنَ ۚ مِنۢ بَعْدِ
وَصِيَّةٍ يُوصِينَ بِهَآ أَوْ دَيْنٍ ۚ وَلَهُنَّ ٱلرُّبُعُ
مِمَّا تَرَكْتُمْ إِن لَّمْ يَكُن لَّكُمْ وَلَدٌ ۚ فَإِن
كَانَ لَكُمْ وَلَدٌ فَلَهُنَّ ٱلثُّمُنُ مِمَّا تَرَكْتُم ۚ
مِّنۢ بَعْدِ وَصِيَّةٍ تُوصُونَ بِهَآ أَوْ دَيْنٍ ۗ
وَإِن كَانَ رَجُلٌ يُورَثُ كَلَٰلَةً أَوِ ٱمْرَأَةٌ
وَلَهُۥٓ أَخٌ أَوْ أُخْتٌ فَلِكُلِّ وَٰحِدٍ مِّنْهُمَا
ٱلسُّدُسُ ۚ فَإِن كَانُوٓاْ أَكْثَرَ مِن ذَٰلِكَ
فَهُمْ شُرَكَآءُ فِى ٱلثُّلُثِ ۚ مِنۢ بَعْدِ وَصِيَّةٍ
يُوصَىٰ بِهَآ أَوْ دَيْنٍ غَيْرَ مُضَآرٍّ ۚ وَصِيَّةً
مِّنَ ٱللَّهِ ۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَلِيمٌ ﴿١٢﴾

Aayaddanna waa aayadda kale ee caddaysay dhaxalka, iyo in cid walba la siin waxay mudatay marka laga bixiyo dardaaranka iyo daynta, waana arrin Alle adkeeyey caddeeyeyna, Rasuulkana (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Alle wuxuu siiyay ruux kastaba xaqiisa ee ma jiro u dardaaran mid wax dhaxli. (Waa saxiix). Waxaa kaloo sugnaatay dardaaranka oo laysku dhibo waa dambiyada waaweyn. Sidaas darteed waa in cid walba la siiyo wixii Alle u sugay, dardaaran iyo kala jeclaysina inaan lagu dhibin ruux xaqiis, illeen Alle ayaa saas faraye, waana in la maqlaa amarkiisa si loo liibaano aakhiro iyo adduunba. **[An-Nisaa': 12].**

13. Taasi waa xuduud Alle, ruuxii adeeca Alle iyo Rasuulkiisa wuxuu galin jannooyin ay dareeri dhexdeeda wabiyaal iyagoo ku waari dhexdeeda, taasina waa liibaan weyn.

تِلْكَ حُدُودُ ٱللَّهِ ۚ وَمَن يُطِعِ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ يُدْخِلْهُ جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَا ۚ وَذَٰلِكَ ٱلْفَوْزُ ٱلْعَظِيمُ ﴿١٣﴾

14. Ruuxiise caasiya Alle iyo Rasuulkiisa oo tallaaba xuduudiisa wuxuu galin naar isagoo ku waari dhexdeeda, wuxuuna mudan cadaab wax dulleeya.

وَمَن يَعْصِ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ وَيَتَعَدَّ حُدُودَهُۥ يُدْخِلْهُ نَارًا خَٰلِدًا فِيهَا وَلَهُۥ عَذَابٌ مُّهِينٌ ﴿١٤﴾

15. Kuwa la imaan xumaan (zino) oo haweenkiinna ka mid ah, marag uga dhiga afar idinka mid ah, hadday ku marag kacaan ku haya guryaha intay ka disho geeridu ama u yeelo Alle waddo.

وَٱلَّٰتِى يَأْتِينَ ٱلْفَٰحِشَةَ مِن نِّسَآئِكُمْ فَٱسْتَشْهِدُوا۟ عَلَيْهِنَّ أَرْبَعَةً مِّنكُمْ ۖ فَإِن شَهِدُوا۟ فَأَمْسِكُوهُنَّ فِى ٱلْبُيُوتِ حَتَّىٰ يَتَوَفَّىٰهُنَّ ٱلْمَوْتُ أَوْ يَجْعَلَ ٱللَّهُ لَهُنَّ سَبِيلًا ﴿١٥﴾

16. Labadii la timaadda xumaanta (zinada) oo idinka mid ah dhiba haddayse toobad keenaan ooy wanaagsanaadaan ka jeedsada xaggooda, Alle na waa toobad aqbale naxariista.

وَٱلَّذَانِ يَأْتِيَٰنِهَا مِنكُمْ فَـَٔاذُوهُمَا ۖ فَإِن تَابَا وَأَصْلَحَا فَأَعْرِضُوا۟ عَنْهُمَآ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ تَوَّابًا رَّحِيمًا ﴿١٦﴾

Aayadaha la soo sheegay waxay caddeeyeen qaddar iyo qaybta ruux kasta iyo in Alle ruuxba qayb siiyay, u dhawaanshaha ruuxa dhintay iyo dhibaatadiisa wuxuuna faray inaan la tallaabin xuduudaas Alle oon cidna loo badinnin midna loo yareynin, waase in loo daayo xukunka Alle iyo qaybintiisa, ciddii sidaas fulisana abaalkeedu waa janno, tii ka leexatana waxay mudan ciqaab daran iyo cadaab wax dulleeya. Tan kale islaamku markuu bilaawday hadday haweenaydu xumaan zino ku kacdo marag baa loo yeeli jiray gurigana way iska joogi jirtay intay ka dhimato ama sharci caddeeyo xaalkeeda, labada kala zinaysatana waxaa lagu ciqaabi jiray dhib aan saas u weynayn, hase yeeshee waxaa ku soo dagay arrintaas xukun ah in ciddii ku kacda xaalkaas isagoo horay wax u guursaday isna arkeen lagu ciqaabi dhagax lagu dilo, kuwaan hadda ka

hor guursanninna boqol ulood lagu dhufto, saasuu Rasuulku (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) yidhi: iga qaata labada bikaarada ah waa boqol ulood, labada wax guursatayna waa boqol ulood iyo dhagax lagu dilo. (Muslim) **[an-nisaa': 13-16].**

إِنَّمَا ٱلتَّوْبَةُ عَلَى ٱللَّهِ لِلَّذِينَ يَعْمَلُونَ ٱلسُّوٓءَ بِجَهَٰلَةٍ ثُمَّ يَتُوبُونَ مِن قَرِيبٍ فَأُو۟لَٰٓئِكَ يَتُوبُ ٱللَّهُ عَلَيْهِمْ ۗ وَكَانَ ٱللَّهُ عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿١٧﴾

17. Toobadda (aqbalkeeda) waxay Alle uga ahaatay kuwa fala xumaha iyagoo jaahil ah markaas toobad keena waqti dhaw kuwaas wuu ka toobad aqbalaa Alle korkooda, Alle na waa oge falsan.

وَلَيْسَتِ ٱلتَّوْبَةُ لِلَّذِينَ يَعْمَلُونَ ٱلسَّيِّـَٔاتِ حَتَّىٰٓ إِذَا حَضَرَ أَحَدَهُمُ ٱلْمَوْتُ قَالَ إِنِّى تُبْتُ ٱلْـَٰٔنَ وَلَا ٱلَّذِينَ يَمُوتُونَ وَهُمْ كُفَّارٌ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ أَعْتَدْنَا لَهُمْ عَذَابًا أَلِيمًا ﴿١٨﴾

18. Uma aha toobaddu ku fala xumaha intuu uga yimaaddo midkood geeridu markaas dhaha anigu waxaan toobad keeni hadda, iyo kuwa dhiman iyagoo gaala ah, kuwaas waxaan u darabnay cadaab daran.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا يَحِلُّ لَكُمْ أَن تَرِثُوا۟ ٱلنِّسَآءَ كَرْهًا ۖ وَلَا تَعْضُلُوهُنَّ لِتَذْهَبُوا۟ بِبَعْضِ مَآ ءَاتَيْتُمُوهُنَّ إِلَّآ أَن يَأْتِينَ بِفَٰحِشَةٍ مُّبَيِّنَةٍ ۚ وَعَاشِرُوهُنَّ بِٱلْمَعْرُوفِ ۚ فَإِن كَرِهْتُمُوهُنَّ فَعَسَىٰٓ أَن تَكْرَهُوا۟ شَيْـًٔا وَيَجْعَلَ ٱللَّهُ فِيهِ خَيْرًا كَثِيرًا ﴿١٩﴾

19. Kuwa (xaqa) rumeeyow idiinma bannaana inaad u dhaxashaan haweenka xoog iyo inaad dhibtaan si aad ula tagtaan (qaadataan) qaar waxaad siiseen inay la yimaadaan xumaan cad mooyee, kulana noolaada si fiican, haddaad kahataan waxaa suurowda inaad kahataan wax uu yeelo Alle dhexdiisa khayr badan.

وَإِنْ أَرَدتُّمُ ٱسْتِبْدَالَ زَوْجٍ مَّكَانَ زَوْجٍ وَءَاتَيْتُمْ إِحْدَىٰهُنَّ قِنطَارًا فَلَا تَأْخُذُوا۟ مِنْهُ شَيْـًٔا ۚ أَتَأْخُذُونَهُۥ بُهْتَٰنًا وَإِثْمًا مُّبِينًا ﴿٢٠﴾

20. Haddaad doontaan inaad ku baddashaan haweenay mid kale idinkoo siiyey meher (badan) ha ka qaadanina xaggiisa waxba, ma waxaad qaadanaysaan been iyo dambi cad.

21. Seed uga qaadanaysaan idinkoo qaarkiin qaar arkay, ood kana qaaddeen ballan adag.

وَكَيْفَ تَأْخُذُونَهُۥ وَقَدْ أَفْضَىٰ
بَعْضُكُمْ إِلَىٰ بَعْضٍ وَأَخَذْنَ مِنكُم
مِّيثَٰقًا غَلِيظًا ﴿٢١﴾

22. Ha guursannina waxay guursadeen aabbayaashiin wixii hor maray mooyee, waa xumaan iyo wax loo cadhoodo waddana iyadaa u xun.

وَلَا تَنكِحُوا۟ مَا نَكَحَ ءَابَآؤُكُم مِّنَ
ٱلنِّسَآءِ إِلَّا مَا قَدْ سَلَفَ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ
فَٰحِشَةً وَمَقْتًا وَسَآءَ سَبِيلًا ﴿٢٢﴾

Dadku wuu dambaabi waase inuu toobadkeeno suginna inta geerida uga imaan. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Alle wuu aqbalaa toobadda addoonkiisa intaan sakaraadku u imaan. Mujaahidna wuxuu yidhi: cid kastoo Alle caasiday waa jaahil intay ka tagto. Aayadaha kale waxay caddayn inaan la dulmiyin haweenka, lana dhibin, xoolahoodana laga xoogin, waxaa kale oo reebban in la guursado haweenaydii aabahaa, arrimahaasuna waa reebban yihiin, waana dambi weyn. **[An-Nisaa': 17-22].**

23. Waxaa laydinka reebay hooyooyinkiin (inaad guursataan) iyo gabdhihiinna, walaalihiin, eedooyinkiin, habaryarihiin, gabdhaha walaalkaa, gabdhaha walaashaa, hooyooyinka idin nuujiyey, walaalaha nuugmada, hooyooyinka haweenkiinna, gabdhahaad dhaqaalaysaan, ee haweenkiinna aad is aragteen dhaleen, haddaydaan is arkin wax dhib ah (danbi) ma saarra korkiinna, haweenka wiilashiinna dhabta ah, iyo inaad kulmisaan labo walaalo ah wixii horay maray mooyee, Alle na waa u dhaafe naxariista.

حُرِّمَتْ عَلَيْكُمْ أُمَّهَٰتُكُمْ
وَبَنَاتُكُمْ وَأَخَوَٰتُكُمْ وَعَمَّٰتُكُمْ
وَخَٰلَٰتُكُمْ وَبَنَاتُ ٱلْأَخِ وَبَنَاتُ
ٱلْأُخْتِ وَأُمَّهَٰتُكُمُ ٱلَّٰتِىٓ أَرْضَعْنَكُمْ
وَأَخَوَٰتُكُم مِّنَ ٱلرَّضَٰعَةِ وَأُمَّهَٰتُ
نِسَآئِكُمْ وَرَبَٰٓئِبُكُمُ ٱلَّٰتِى فِى
حُجُورِكُم مِّن نِّسَآئِكُمُ ٱلَّٰتِى دَخَلْتُم
بِهِنَّ فَإِن لَّمْ تَكُونُوا۟ دَخَلْتُم بِهِنَّ فَلَا
جُنَاحَ عَلَيْكُمْ وَحَلَٰٓئِلُ أَبْنَآئِكُمُ
ٱلَّذِينَ مِنْ أَصْلَٰبِكُمْ وَأَن تَجْمَعُوا۟ بَيْنَ
ٱلْأُخْتَيْنِ إِلَّا مَا قَدْ سَلَفَ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ
غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿٢٣﴾

* وَٱلْمُحْصَنَٰتُ مِنَ ٱلنِّسَآءِ إِلَّا مَا
مَلَكَتْ أَيْمَٰنُكُمْ ۖ كِتَٰبَ ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ ۚ
وَأُحِلَّ لَكُم مَّا وَرَآءَ ذَٰلِكُمْ أَن تَبْتَغُوا۟
بِأَمْوَٰلِكُم مُّحْصِنِينَ غَيْرَ مُسَٰفِحِينَ ۚ
فَمَا ٱسْتَمْتَعْتُم بِهِۦ مِنْهُنَّ فَـَٔاتُوهُنَّ
أُجُورَهُنَّ فَرِيضَةً ۚ وَلَا جُنَاحَ عَلَيْكُمْ
فِيمَا تَرَٰضَيْتُم بِهِۦ مِنۢ بَعْدِ ٱلْفَرِيضَةِ ۚ
إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿٢٤﴾

24. Waxaa kaloo idinka reebban haweenka la qabo, waxay hantaan gacmihiinnu mooyee, kitaabka Alle ayaa korkiinna ah, waxaa laydiin banneeyey waxa ka soo hadhay kuwaas inaad ku dalabtaan xoolahiinna idinkoo dhawrsoon oon xumaan (zino) falin, waxaad ku intifaacdaan xaggooda siiya meherkooda, waa qadaraad Alle, dhib (dambi) korkiinna ma saarra waxaad isaga raalli noqoteen qadarrida ka dib, Alle na waa oge falsan.

Aayaddani waxay caddayn waxa ka reebban ninka inuu guursado oo haween ah, Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: waxay ku xarrimantay todobo nasab, todobana xidid. Sidoo kale cidda wax nuujisa iyo tan kula nuugta. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: waxaa ku reebban nuugmada waxa ku reebban nasabka, waase inay ahaato shan nuugmo. Sidoo kale waxaa reebban haweenay la qabo, Alle na waa oge falsan oo waxa fiican ku toosin dadka. **[An-Nisaa': 23-24].**

وَمَن لَّمْ يَسْتَطِعْ مِنكُمْ طَوْلًا أَن
يَنكِحَ ٱلْمُحْصَنَٰتِ ٱلْمُؤْمِنَٰتِ فَمِن
مَّا مَلَكَتْ أَيْمَٰنُكُم مِّن فَتَيَٰتِكُمُ
ٱلْمُؤْمِنَٰتِ ۚ وَٱللَّهُ أَعْلَمُ بِإِيمَٰنِكُمْ ۚ
بَعْضُكُم مِّنۢ بَعْضٍ ۚ فَٱنكِحُوهُنَّ
بِإِذْنِ أَهْلِهِنَّ وَءَاتُوهُنَّ أُجُورَهُنَّ
بِٱلْمَعْرُوفِ مُحْصَنَٰتٍ غَيْرَ مُسَٰفِحَٰتٍ
وَلَا مُتَّخِذَٰتِ أَخْدَانٍ ۚ فَإِذَآ أُحْصِنَّ فَإِنْ
أَتَيْنَ بِفَٰحِشَةٍ فَعَلَيْهِنَّ نِصْفُ مَا عَلَى
ٱلْمُحْصَنَٰتِ مِنَ ٱلْعَذَابِ ۚ

25. Ruuxaan karin oo idinka mid ah awood uu ku guursado haweenka xorta ah ee rumeysan (xaqa) ha guursado waxay hanatay gacmihiinnu oo ah gabdhaha rumeysan (xaqa) Alle na waa ogyahay iimaankiinna, qaarkiin qaarbuu ka ahaaday, kuna guursada idamka ehelkooda, u siiyana ujuurada (meherkooda) si fiican, iyagoo dhawrsoon oo xumaan (zino) ka dheer, saaxiibbana yeelanayn, haddii lagu dhawro (guur) ooy xumaan

ذَٰلِكَ لِمَنْ خَشِيَ ٱلْعَنَتَ مِنكُمْ ۚ وَأَن تَصْبِرُوا۟ خَيْرٌ لَّكُمْ ۗ وَٱللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٢٥﴾

la yimaadaan korkooda waxaa ah nus waxa ah kuwa xorta ah oo ciqaab ah, arrintaas waa ruuxii ka cabsada zino, oo idinka mid ah, haddaadse samirtaan yaa idiin khayr roon, Alle na waa dambi dhaafe naxariista.

يُرِيدُ ٱللَّهُ لِيُبَيِّنَ لَكُمْ وَيَهْدِيَكُمْ سُنَنَ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِكُمْ وَيَتُوبَ عَلَيْكُمْ ۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿٢٦﴾

26. Wuxuu dooni Alle inuu idiin caddeeyo idinkuna hanuuniyo wadadii kuwii idinka horreeyey oo idinka toobad aqbalo Alle na waa oge falsan.

وَٱللَّهُ يُرِيدُ أَن يَتُوبَ عَلَيْكُمْ وَيُرِيدُ ٱلَّذِينَ يَتَّبِعُونَ ٱلشَّهَوَٰتِ أَن تَمِيلُوا۟ مَيْلًا عَظِيمًا ﴿٢٧﴾

27. Alle wuxuu dooni inuu idinka toobad aqbalo waxayse dooni kuwii raacay waxa naftoodu jeceshahay inaad iilataan iilasho wayn.

يُرِيدُ ٱللَّهُ أَن يُخَفِّفَ عَنكُمْ ۚ وَخُلِقَ ٱلْإِنسَٰنُ ضَعِيفًا ﴿٢٨﴾

28. Wuxuu dooni Alle inuu idinka fudeydiyo, waxaase la abuuray dadka isagoo tabar yar.

Waa in guurku ahaadaa mid laga fiirsado, oo la guursadaa haweenka xorta ah ee dhawrsoon, haddii tabar loo waayana la guursado kuwa dhawrsoon ood hanataan haddaad xumaan ka yaabtaan, iyagoo la warsan ehelkooda, xumaan hadday falaanna waxaa la ciqaabi nus ciqaabta kuwa xorta ah. Tan kale Alle wanaag iyo hanuun yuu inala rabaa iyo fudayd, kuwa xumaanta iyo waxay naftoodu jeceshahay raacayse waxay idinla dooni inaad si weyn u dhuntaan. Wax badan baa ku soo arooray tabaryarida dadka xagga cibaadada iyo xagga dooniddaba. **[An-Nisaa': 25-28].**

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تَأْكُلُوٓا۟ أَمْوَٰلَكُم بَيْنَكُم بِٱلْبَٰطِلِ إِلَّآ أَن تَكُونَ تِجَٰرَةً عَن تَرَاضٍ مِّنكُمْ ۚ وَلَا تَقْتُلُوٓا۟ أَنفُسَكُمْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ بِكُمْ رَحِيمًا ﴿٢٩﴾

29. Kuwa (xaqa) rumeeyow ha cunina xoolihiinna dhexdiinna (si baadil ah) (xaaraam ah) inay ganacsi raalli aad isaga tihiin tahay mooyee, hana dilina naftiinna, Alle wuxuu idiin yahay naxariistee.

30. Ciddii u fasha arrintaas colnimo iyo dulmi waxaannu galin doonnaa naar, arrintaasna Alle waa u fududdahay.

وَمَن يَفْعَلْ ذَٰلِكَ عُدْوَٰنًا وَظُلْمًا فَسَوْفَ نُصْلِيهِ نَارًا ۚ وَكَانَ ذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ يَسِيرًا ﴿٣٠﴾

31. Haddaad ka dheeraataan dambiyada la idinka reebaayo kuwooda waaweyn waxaannu ka asturi xaggiinna xumaantiinna waxaanna idin galin meel fiican (sharaf leh).

إِن تَجْتَنِبُوا۟ كَبَآئِرَ مَا تُنْهَوْنَ عَنْهُ نُكَفِّرْ عَنكُمْ سَيِّـَٔاتِكُمْ وَنُدْخِلْكُم مُّدْخَلًا كَرِيمًا ﴿٣١﴾

32. Ha tamanniyina wuxuu kaga fadilay Alle qaarkiin qaar, ragga waxaa u sugnaaday qayb waxay kasbadeen, haweenkana waxaa u sugnaaday qayb waxay kasbadeen, waydiista Alle fadligiisa, Alle na wax kasta waa og yahay.

وَلَا تَتَمَنَّوْا۟ مَا فَضَّلَ ٱللَّهُ بِهِۦ بَعْضَكُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ ۚ لِّلرِّجَالِ نَصِيبٌ مِّمَّا ٱكْتَسَبُوا۟ ۖ وَلِلنِّسَآءِ نَصِيبٌ مِّمَّا ٱكْتَسَبْنَ ۚ وَسْـَٔلُوا۟ ٱللَّهَ مِن فَضْلِهِۦٓ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمًا ﴿٣٢﴾

33. Cid kasta waxaan u yeellay kuwo dhaxla waxay ka tageen labada waalid iyo qaraabadu iyo kuwaad guntateen dhaar (isdhaarsateen) siiya qaybtooda, (oo gargaar ah), Alle na wax kasta waa u marag.

وَلِكُلٍّ جَعَلْنَا مَوَٰلِىَ مِمَّا تَرَكَ ٱلْوَٰلِدَانِ وَٱلْأَقْرَبُونَ ۚ وَٱلَّذِينَ عَقَدَتْ أَيْمَٰنُكُمْ فَـَٔاتُوهُمْ نَصِيبَهُمْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ شَهِيدًا ﴿٣٣﴾

Aayadaha hore waxay caddayn xaaraannimada xoolaha dadka oo xaq darro lagu cuno ganacsiga xalaasha ah ee lagu heshiiyase waa bannaan yahay, is dilkuna waa reebban yahay illeen muslimiintu waa naf kaliyee, ciddii saas fashana waxaa lagu ciqaabi naar, haddii dambiyada waaweyn laga dhawrsadana Alle wuu dhaafi xumaanta kale jannana wuu galin, xasadka iyo niyad xumiduna waa la reebay, cid walbase waxaa u bannaan shaqo iyo kasab xalaala iyo inuu Alle wax warsado, cid walbana mudan waxay waalidku iyo qaraabadu ka tagaan, iyadoo wax laga siin ciddaad is xidhiidhisaan, dambiyada waaweynna waxaa ka mid ah: gaalnimo, dil xaq darro ee muslim, ka cararka jahaadka, caasiga waalidka, zino ku sheegga haweeney dhawrsoon, barashada sixirka, cunidda ribada iyo cunidda xoolaha agoonta, zinada, dhaarta beenta ah, iyo kuwo kale. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: dambiyada waaweyn todoba waxay uga dhaw yihiin todobaatan, **[an-nisaa': 29-33].**

34. Raggaa u taagan (maamulka) haweenka, ka fadilida Alle qaarkood qaar iyo ku nafaqaynta xoolahooda darteed, (haweenka) wanaagsan way adeecaan, ilaaliyaanna naftooda maqnaasho, ilaalinta Alle darteed, kuwaadse ka cabsataan caasinnimadooda waaniya, kagana fogaada jiifka, garaacana, hadday idin adeecaanna ha u dalbina korkooda jid (inaad dhibtaan), Alle na wuxuu ahaaday sarreeye wayn.

ٱلرِّجَالُ قَوَّٰمُونَ عَلَى ٱلنِّسَآءِ بِمَا فَضَّلَ ٱللَّهُ بَعۡضَهُمۡ عَلَىٰ بَعۡضٖ وَبِمَآ أَنفَقُواْ مِنۡ أَمۡوَٰلِهِمۡۚ فَٱلصَّٰلِحَٰتُ قَٰنِتَٰتٌ حَٰفِظَٰتٞ لِّلۡغَيۡبِ بِمَا حَفِظَ ٱللَّهُۚ وَٱلَّٰتِي تَخَافُونَ نُشُوزَهُنَّ فَعِظُوهُنَّ وَٱهۡجُرُوهُنَّ فِي ٱلۡمَضَاجِعِ وَٱضۡرِبُوهُنَّۖ فَإِنۡ أَطَعۡنَكُمۡ فَلَا تَبۡغُواْ عَلَيۡهِنَّ سَبِيلًاۗ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَلِيّٗا كَبِيرٗا ٣٤

35. Haddaad ka cabsataan iskhilaafka dhexdooda u bixiya xaq soore ehelkiisa ah iyo xaq soore ehelkeeda ah, hadday doonaan wanaajinna Alle wuu iswaafajin dhexdooda, Alle na waa oge xeeldheer.

وَإِنۡ خِفۡتُمۡ شِقَاقَ بَيۡنِهِمَا فَٱبۡعَثُواْ حَكَمٗا مِّنۡ أَهۡلِهِۦ وَحَكَمٗا مِّنۡ أَهۡلِهَآ إِن يُرِيدَآ إِصۡلَٰحٗا يُوَفِّقِ ٱللَّهُ بَيۡنَهُمَآۗ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَلِيمًا خَبِيرٗا ٣٥

36. Caabuda Alle hana la wadaajinnina waxba, labada waalidna u wanaag fala, iyo qaraabada, agoonta, masaakiinta, dariska dhaw, dariska durugsan, saaxiibka dhinaca, socotada iyo waxay hanatay gacmihiinnu, Alle na ma jecla cidda kibirka badan ee faanka badan.

* وَٱعۡبُدُواْ ٱللَّهَ وَلَا تُشۡرِكُواْ بِهِۦ شَيۡـٔٗاۖ وَبِٱلۡوَٰلِدَيۡنِ إِحۡسَٰنٗا وَبِذِي ٱلۡقُرۡبَىٰ وَٱلۡيَتَٰمَىٰ وَٱلۡمَسَٰكِينِ وَٱلۡجَارِ ذِي ٱلۡقُرۡبَىٰ وَٱلۡجَارِ ٱلۡجُنُبِ وَٱلصَّاحِبِ بِٱلۡجَنۢبِ وَٱبۡنِ ٱلسَّبِيلِ وَمَا مَلَكَتۡ أَيۡمَٰنُكُمۡۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُحِبُّ مَن كَانَ مُخۡتَالٗا فَخُورًا ٣٦

Ragga iyo haweenka Alle ayaa isu abuuray mid walbana si u abuuray, una yeelay shaqooyin lagu kala habboon yahay sida uurka, nuujinta iyo wixii la mid ah, saas darteed mar haddii meel lagu wada nool yahay waa in ninku ilaaliyaa qoyska oo nafaqeeyaa, oo hoggaamiye u noqdaa, haweeneyda fiicanna waa tan suubban ee dhawrsoon, hadday gaftana waa la waanin, haddii laga noogana

waa laga fogaan jiifka, lana garaaci, hadday toosnaato wax jid ah laguma leh, hadduu khilaaf yimaadana waxaa loo bixin qaraabada labada dhinac, oo is waafajin, Alle na waa in la caabudo waxna lala wadaajin, loona samo falo waalidka, qaraabada, agoonta, masaakiinta, dariska dhaw, dariska durugsan, saaxiibka dhabta ah, socotoda, iyo waxa gacmahooda ku hoos jira. Kibir iyo faanna Alle ma jecla. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: waxaa ku wareega ehelka Muxamed haween ka sheegan raggooda, raggaasina ma aha kuwo fiican (Abuu Daawuud). Bal day aayadahan sida islaamka ugu dadaali wanaagga, heshiiska, naxariista, iyo isdhaqaalaynta iyo is taakulaynta. Saaxiibka u fiican waa kan u fiican saaxiibkii, (imaam Axmed). Taasina waxay dharbaaxo ku tahay kuwa islaamka iyo haweenkiisa wax ka sheega een wax kasayn. **[An-Nisaa': 34-36].**

37. Oo ah kuwa bakhayla farana dadka bakhaylnimo qarinna wuxuu siiyey Alle oo fadli ah, waxaana u darabnay gaalada cadaab wax dulleeya.

ٱلَّذِينَ يَبۡخَلُونَ وَيَأۡمُرُونَ ٱلنَّاسَ بِٱلۡبُخۡلِ وَيَكۡتُمُونَ مَآ ءَاتَىٰهُمُ ٱللَّهُ مِن فَضۡلِهِۦۗ وَأَعۡتَدۡنَا لِلۡكَٰفِرِينَ عَذَابٗا مُّهِينٗا ٣٧

38. Iyo kuwa u bixiya xoolahooda istuska dadka oon rumeyn Alle iyo maalinta dambe, ruuxii shaydaan u noqdo saaxiib wuu xumaaday saaxiibkiis.

وَٱلَّذِينَ يُنفِقُونَ أَمۡوَٰلَهُمۡ رِئَآءَ ٱلنَّاسِ وَلَا يُؤۡمِنُونَ بِٱللَّهِ وَلَا بِٱلۡيَوۡمِ ٱلۡأٓخِرِۗ وَمَن يَكُنِ ٱلشَّيۡطَٰنُ لَهُۥ قَرِينٗا فَسَآءَ قَرِينٗا ٣٨

39. Maxaa (dhiba) oo korkooda ahaaday hadday rumeeyaan Alle iyo maalinta dambe oy bixiyaan qayb wuxuu ku arzuqay Alle, ilaahayna waa og yahay iyaga.

وَمَاذَا عَلَيۡهِمۡ لَوۡ ءَامَنُواْ بِٱللَّهِ وَٱلۡيَوۡمِ ٱلۡأٓخِرِ وَأَنفَقُواْ مِمَّا رَزَقَهُمُ ٱللَّهُۚ وَكَانَ ٱللَّهُ بِهِمۡ عَلِيمًا ٣٩

40. Alle ma dulmiyo wax la eg darro (wax yar) hadday wanaag tahayna wuu laab laabaa wuuna ka siin agtiisa ajir weyn.

إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَظۡلِمُ مِثۡقَالَ ذَرَّةٖۖ وَإِن تَكُ حَسَنَةٗ يُضَٰعِفۡهَا وَيُؤۡتِ مِن لَّدُنۡهُ أَجۡرًا عَظِيمٗا ٤٠

41. Ee say ahaan markaan ka keenno ummad kasta marag oon kuu keenno adigana (Nabiga) kuwaas korkooda marag.

فَكَيۡفَ إِذَا جِئۡنَا مِن كُلِّ أُمَّةِۭ بِشَهِيدٖ وَجِئۡنَا بِكَ عَلَىٰ هَٰٓؤُلَآءِ شَهِيدٗا ٤١

42. Maalintaas waxay jeclaan kuwii gaaloobay oo caasiyey Rasuulka in lala simo dhulka (oo uu liqo) kamana qariyaan Alle hadal.

يَوْمَئِذٍ يَوَدُّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَعَصَوُا۟ ٱلرَّسُولَ لَوْ تُسَوَّىٰ بِهِمُ ٱلْأَرْضُ وَلَا يَكْتُمُونَ ٱللَّهَ حَدِيثًا ﴿٤٢﴾

Bakhaylnimadu waa ceeb waana la caayey, waxaabase ka sii daran inaad fartid dadka bakhaylnimo, waana inaad xaqa wax ku bixin weydo, ama qariso wax wanaag ah ee Alle ku siiyey ama wax u bixiso istustus aadan dar Alle u bixinin, kuwaas shaydaan baa ka saaxiib yeeshay, cidduu la saaxiibana way khasaartay, waase in la rumeeyo Alle iyo qiyaamada waxna la baxsado, illeen Alle dadka kama dulmiyo wax yarnee, hadday wanaag tahayna wuu u laab laabi oo siin ajir weyn, xaalkuse sees noqon marka ummad walba marag loo keeno, Nabigana marag loogu keeno umaddiisa. Maalintaas gaalada Rasuulka caasiday waxay jeclaan in dhulku la go'o, cid wax ka qarin Alle na ma jirto, waxaa sugnaaday: marka Alle u nicmeeyo addoon wuxuu jecel yahay inay ka muuqato raadkeedu.

Cabdullahi binu Mascuud wuxuu yidhi: Rasuulkaa i yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeele): igu akhri quraanka markaasaan idhi ma waxaan kugu akhriyaa adoo lagugu soo dajiyey? Markaasuu yidhi: waxaan jeclahay inaan cid kale ka maqlo, markaasaan ku akhriyey suuratu nisaa intaan ka gaadho: (say ahaan markaan uga keenno ummad kasta marag). Markaasuu yidhi: waa ku filan tahay, isagoy indhihiisu ilmayn. (Bukhaari). **[An-Nisaa': 37-42].**

43. Kuwa (xaqa) rumeeyow haw dhawaannina salaadda idinkoo sakhraansan (aayaddu waxay soo degtay intaanan khamriga la xarrimin) intaad ka garataan waxaad dhahaysaan iyo idinkoo junub ah inaad jid gudbaysaan mooyee intaad ka maydhataan, haddaad tihiin kuwa buka ama safar ah ama uu ka yimid ruux idin ka mid ah kortag, ama taabataan haweeneey aadanna helayn biyo, ku gagabaysta carro wanaagsan, kuna masaxa (mariya) wajiyadiinna iyo gacmihiinna, Alle na waa cafiye dambi dhaafa.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تَقْرَبُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ وَأَنتُمْ سُكَٰرَىٰ حَتَّىٰ تَعْلَمُوا۟ مَا تَقُولُونَ وَلَا جُنُبًا إِلَّا عَابِرِى سَبِيلٍ حَتَّىٰ تَغْتَسِلُوا۟ ۚ وَإِن كُنتُم مَّرْضَىٰٓ أَوْ عَلَىٰ سَفَرٍ أَوْ جَآءَ أَحَدٌ مِّنكُم مِّنَ ٱلْغَآئِطِ أَوْ لَٰمَسْتُمُ ٱلنِّسَآءَ فَلَمْ تَجِدُوا۟ مَآءً فَتَيَمَّمُوا۟ صَعِيدًا طَيِّبًا فَٱمْسَحُوا۟ بِوُجُوهِكُمْ وَأَيْدِيكُمْ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَفُوًّا غَفُورًا ﴿٤٣﴾

44. Ka warran kuwa la siiyey qayb kitaabka ah (tawreed) oo gadan baadi doonina inaad ka dhuntaan jidka.

أَلَمْ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ نَصِيبًا مِّنَ ٱلْكِتَٰبِ يَشْتَرُونَ ٱلضَّلَٰلَةَ وَيُرِيدُونَ أَن تَضِلُّوا۟ ٱلسَّبِيلَ ﴿٤٤﴾

45. Alle ayaa og colkiinna, Alle ayaana welinnimo idinku filan (oo arrimihiinna ka taliya), wuxuuna ku filan yahay Alle gargaare.

وَٱللَّهُ أَعْلَمُ بِأَعْدَآئِكُمْ ۚ وَكَفَىٰ بِٱللَّهِ وَلِيًّا وَكَفَىٰ بِٱللَّهِ نَصِيرًا ﴿٤٥﴾

46. Kuwii yuhuudoobay waxay ka leexin kalimooyinka meelahooda waxayna dhihi waan maqallay oon caasinnay, maqal ha maqline, waxayna (dhihi) na ilaali iilid carrabkooda iyo durid diinta (islaamka) darteed, hadday dhahaan waan maqalnay waana adeecnay ee maqal na dayna saasaa u khayr roonaan lahayd una toosnaan lahayd, laakiin waxaa lacnaday Alle gaalnimadooda darteed mana rumeeyaan wax yar mooyee.

مِّنَ ٱلَّذِينَ هَادُوا۟ يُحَرِّفُونَ ٱلْكَلِمَ عَن مَّوَاضِعِهِۦ وَيَقُولُونَ سَمِعْنَا وَعَصَيْنَا وَٱسْمَعْ غَيْرَ مُسْمَعٍ وَرَٰعِنَا لَيًّۢا بِأَلْسِنَتِهِمْ وَطَعْنًا فِى ٱلدِّينِ ۚ وَلَوْ أَنَّهُمْ قَالُوا۟ سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا وَٱسْمَعْ وَٱنظُرْنَا لَكَانَ خَيْرًا لَّهُمْ وَأَقْوَمَ وَلَٰكِن لَّعَنَهُمُ ٱللَّهُ بِكُفْرِهِمْ فَلَا يُؤْمِنُونَ إِلَّا قَلِيلًا ﴿٤٦﴾

Ruuxaan kasayn wuxuu ku hadli ma bannaana inuu salaadda galo, sidii kuwii tukanaayey iyagoo wax maskaxda dooriyey cabba, tan kale Alle ma cidhiidhyin muslimka, oo cidda junubta, ama jirran, ama safar ah, ama kortaga, ama haween taabata oon biyo helin wuu gagabaysan, taasoo ah inuu carrada wajiga iyo gacmaha mariyo, Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: dhulka masjidbaa nalooga dhigay carradiisana daahir. Aayadaha kale waxay ka warrami yahuud iyo xumaantooda iyo say xaqa uga leexdeen, una leexiyeen, haddallo xun iyo dhibna ay ugu hadlaan, taasina waa waxa Alle ku nacladay uguna cadhooday, waana caado ay iska leeyihiin oy iska dhaxleen xaq diidka iyo xumaan jacaylka. **[An-Nisaa': 43-46].**

47. Kuwa la siiyey kitaabkow rumeeya waxaan soo dajinnay isagoo rumeyn waxaad

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْكِتَٰبَ ءَامِنُوا۟ بِمَا نَزَّلْنَا مُصَدِّقًا لِّمَا مَعَكُم مِّن قَبْلِ

أَن نَّطۡمِسَ وُجُوهٗا فَنَرُدَّهَا عَلَىٰٓ أَدۡبَارِهَآ أَوۡ نَلۡعَنَهُمۡ كَمَا لَعَنَّآ أَصۡحَٰبَ ٱلسَّبۡتِۚ وَكَانَ أَمۡرُ ٱللَّهِ مَفۡعُولًا ﴿٤٧﴾

haysataan ka hor intaannan masixin wajiyaal oon u celinno gadaasheeda ama nacladno sidaan u nacladnay asaxaabtii (kuwii) sabtida (yuhuudda) wixii Alle amar ku bixiyo ahaanshihiisana waa kii ahaada (oo fula).

إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَغۡفِرُ أَن يُشۡرَكَ بِهِۦ وَيَغۡفِرُ مَا دُونَ ذَٰلِكَ لِمَن يَشَآءُۚ وَمَن يُشۡرِكۡ بِٱللَّهِ فَقَدِ ٱفۡتَرَىٰٓ إِثۡمًا عَظِيمًا ﴿٤٨﴾

48. Alle ma dhaafo in cibaadada lala wadaajiyo, wuxuuse ka dhaafaa waxaa wixii ka soo hadhay cidduu doono, ruuxii la wadaajiyo Alle wuxuu been abuurtay dambi weyn.

أَلَمۡ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ يُزَكُّونَ أَنفُسَهُمۚ بَلِ ٱللَّهُ يُزَكِّي مَن يَشَآءُ وَلَا يُظۡلَمُونَ فَتِيلًا ﴿٤٩﴾

49. Ka warrama kuwa daahirin (ammaani) naftooda, Alle ayaa daahiriya cidduu doono lagamana dulmiyo waxa ku dhaggan jeex laf timireed (wax yar).

ٱنظُرۡ كَيۡفَ يَفۡتَرُونَ عَلَى ٱللَّهِ ٱلۡكَذِبَۖ وَكَفَىٰ بِهِۦٓ إِثۡمٗا مُّبِينًا ﴿٥٠﴾

50. Day siday ugu been abuuran Alle isagaa ugu filan dambi cad.

أَلَمۡ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ أُوتُواْ نَصِيبٗا مِّنَ ٱلۡكِتَٰبِ يُؤۡمِنُونَ بِٱلۡجِبۡتِ وَٱلطَّٰغُوتِ وَيَقُولُونَ لِلَّذِينَ كَفَرُواْ هَٰٓؤُلَآءِ أَهۡدَىٰ مِنَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ سَبِيلًا ﴿٥١﴾

51. Ka warran kuwa la siiyey qayb kitaabka ah oo rumeyn sixir iyo shaydaan, una dhihi kuwa gaaloobay kuwaasaa ka hanuunsan (toosan) kuwa rumeeyey jidkooda.

أُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ لَعَنَهُمُ ٱللَّهُۖ وَمَن يَلۡعَنِ ٱللَّهُ فَلَن تَجِدَ لَهُۥ نَصِيرًا ﴿٥٢﴾

52. Kuwaas waa kuwuu nacladay Alle, cid Alle nacladayna uma heshid gargaare.

Waxaase loogu yeedhi gaalada ehelu kitaabka ah inay rumeeyaan quraanka rumeeyey kutubtii hore intaan Alle doorinin, ama nacladin siduu u nacladay kuwii sabtida dambaabay ee yuhuudeed. Alle na waa ka dhaafaa dadka waxaan

gaalnimo ahayn, hadduu doono, gaalnimose waa dambi weyn, mana aha inay is ammaanaan, Alle ayaa og cidda ammaan mudane, been abuurasho, xumaan iyo shaydaan la rumeeyo, iyo sheegasho ka toosnaanta muslimiinta waxay sabab u tahay naclad, wax u gargaarana ma helaan. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: dulmigu waa saddex, midkood ma dhaafo Alle, midna wuu dhaafaa, midna kama tago, kuusan dhaafayn waa gaalnimada, kuu dhaafi waa dambiga kale, kuusan ka tagayna waa is dulminta dadka qaarkood qaar ilaa la isaga abaal mariyo. Waxaa wariyey (Bazzaar). **[An-Nisaa': 47-52].**

أَمْ لَهُمْ نَصِيبٌ مِّنَ ٱلْمُلْكِ فَإِذًا لَّا يُؤْتُونَ ٱلنَّاسَ نَقِيرًا ﴿٥٣﴾

53. Mise waxay leeyihiin qayb xukunka oo markaas ayan siinayn dadka laf timir duleelkeed (wax buuxiya).

أَمْ يَحْسُدُونَ ٱلنَّاسَ عَلَىٰ مَآ ءَاتَىٰهُمُ ٱللَّهُ مِن فَضْلِهِۦ ۖ فَقَدْ ءَاتَيْنَآ ءَالَ إِبْرَٰهِيمَ ٱلْكِتَٰبَ وَٱلْحِكْمَةَ وَءَاتَيْنَٰهُم مُّلْكًا عَظِيمًا ﴿٥٤﴾

54. Mise waxay ku xasdi dadka waxa Alle siiyey oo fadli ah, waxaan siinnay ehelkii Ibraahiim kitaabka iyo xigmad, waxaana siinnay xukun wayn.

فَمِنْهُم مَّنْ ءَامَنَ بِهِۦ وَمِنْهُم مَّن صَدَّ عَنْهُ ۚ وَكَفَىٰ بِجَهَنَّمَ سَعِيرًا ﴿٥٥﴾

55. Waxaase ka mid noqday mid rumeeya (xaqa) waxaana ka mid ah mid ka jeedsada xaqa, waxaa ugu filan jahannamo gubid.

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا سَوْفَ نُصْلِيهِمْ نَارًا كُلَّمَا نَضِجَتْ جُلُودُهُم بَدَّلْنَٰهُمْ جُلُودًا غَيْرَهَا لِيَذُوقُوا۟ ٱلْعَذَابَ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَزِيزًا حَكِيمًا ﴿٥٦﴾

56. Kuwii ka gaaloobay aayaadkannaga waxaannu galin naarta, mar kastoos gubto haragoodu waxaan ku badalnaa hargo kale si ay u dhadhamiyaan cadaabka, Alle na waa adkaade falsan.

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ سَنُدْخِلُهُمْ جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدًا ۖ لَّهُمْ فِيهَآ أَزْوَٰجٌ مُّطَهَّرَةٌ ۖ وَنُدْخِلُهُمْ ظِلًّا ظَلِيلًا ﴿٥٧﴾

57. Kuwa rumeeyey (xaqa) oo falay camal fiican waxaan galinaynaa jannooyin ay dareeri dhexdeeda wabiyaal, oyna ku waari dhexdeeda waligood, waxayna ku mudan haween la daahiriyey waxaana galinaynaa hoos fiican.

Aayaduhu waxay caddayn xasadka yuhuud iyo inayna u oggolayn muslimiinta wanaag iyo khayr sidii iyagoo awoodda wax ku leh, Alle cidduu doono yuu siiyaa kitaab iyo xigmad iyo xukun, ciddii xaqa rumeysa iyo tii ka jeedsatana waa uun laga abaalmarin, kuwa gaaloobana oo beeniya aayaadka Alle waxay gali naar gubi jidhkooda markastoy gubatana lagu badali mid kale si ay u dhadhamiyaan cadaabka, kuwa xaqa rumeeyeyna oo camal fiican fala waxay gali janno oy ku waari oo wanaagsan. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: jannada waxaa ku yaal geed uu socon hooskeeda mid saaran gaadiid boqol sano oosan goynayn. (Bukhaari, Muslim). **[An-Nisaa': 53-57].**

إِنَّ ٱللَّهَ يَأۡمُرُكُمۡ أَن تُؤَدُّواْ ٱلۡأَمَٰنَٰتِ إِلَىٰٓ أَهۡلِهَا وَإِذَا حَكَمۡتُم بَيۡنَ ٱلنَّاسِ أَن تَحۡكُمُواْ بِٱلۡعَدۡلِۚ إِنَّ ٱللَّهَ نِعِمَّا يَعِظُكُم بِهِۦٓۗ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ سَمِيعَۢا بَصِيرٗا ﴿٥٨﴾

58. Alle wuxuu idin fari inaad u guddaan (siisaan) ammaanada ehelkeeda (ciddeeda), haddaad kala xukumaysaan dadkana inaad ku kala xukuntaan caddaalad, Alle waxaa wanaagsan wuxuu idinku waanin, Alle na waa maqle arka.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ أَطِيعُواْ ٱللَّهَ وَأَطِيعُواْ ٱلرَّسُولَ وَأُوْلِي ٱلۡأَمۡرِ مِنكُمۡۖ فَإِن تَنَٰزَعۡتُمۡ فِي شَيۡءٖ فَرُدُّوهُ إِلَى ٱللَّهِ وَٱلرَّسُولِ إِن كُنتُمۡ تُؤۡمِنُونَ بِٱللَّهِ وَٱلۡيَوۡمِ ٱلۡأٓخِرِۚ ذَٰلِكَ خَيۡرٞ وَأَحۡسَنُ تَأۡوِيلًا ﴿٥٩﴾

59. Kuwa (xaqa) rumeeyow adeeca Alle oo adeeca Rasuulka iyo kuwa amarka leh, oo idinka mid ah, haddaad ku dooddaan arrin u celiya Alle iyo Rasuulka haddaad tihiin kuwo rumeeyey Alle iyo maalinta dambe (qiyaamada), saasaana khayr roon oo wanaag badan xagga abaalmarinta.

أَلَمۡ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ يَزۡعُمُونَ أَنَّهُمۡ ءَامَنُواْ بِمَآ أُنزِلَ إِلَيۡكَ وَمَآ أُنزِلَ مِن قَبۡلِكَ يُرِيدُونَ أَن يَتَحَاكَمُوٓاْ إِلَى ٱلطَّٰغُوتِ وَقَدۡ أُمِرُوٓاْ أَن يَكۡفُرُواْ بِهِۦ وَيُرِيدُ ٱلشَّيۡطَٰنُ أَن يُضِلَّهُمۡ ضَلَٰلَۢا بَعِيدٗا ﴿٦٠﴾

60. Ka warran kuwa sheegan inay rumeeyeen waxa lagugu soo dejiyey iyo waxa lagu dejiyey kuwii kaa horreeyay iyagoo jecel inay u xukuntamaan shaydaan, iyagoo la faray inay diidaan, wuxuuna dooni shaydaanku inuu baadiyeeyo baadi fog.

وَإِذَا قِيلَ لَهُمْ تَعَالَوْا۟ إِلَىٰ مَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ وَإِلَى ٱلرَّسُولِ رَأَيْتَ ٱلْمُنَٰفِقِينَ يَصُدُّونَ عَنكَ صُدُودًا ﴿٦١﴾

61. Marka lagu dhaho u kaalaya waxuu soo dejiyey Alle iyo xagga Rasuulka waxaad arkaysaa munaafiqiinta oo kaa jeedsan jeedsasho.

Ammaanadoo la dhawro loona celiyo ciddeeda iyo caddaaladda dadka lagu maamulo laguna kala xukumo waa waxyaalaha waawayn oy diinta islaamku fari sidoo kale Alle oo la adeeco iyo Rasuulka iyo kuwa hoggaamiya muslimiinta oo culimada iyo xaakimka muslimiinta ah, wixii dood ahna loo celiyo Alle iyo Rasuulkiisa, saasaana wanaag badan, madaxda muslinka ah macsi laguma adeecayo, laakiin maamulkooda laga hoos bixi mayo, kuwa munaafiqiinta ah oo dooni inay shaydaan iyo wax leexsan isku xukumaan oo ka baxsan quraanka iyo islaamka kuwaas shaydaan baa dhumiyey, marka quraanka iyo Rasuulka loogu yeedhana way jeedsadaan. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: waxa la isku adeeco waa uun waxa fiican. Mar kalana wuxuu yidhi: layskuma adeeco xumaan. Taasoo ah in khayrka laysku maqlo, waxa xunse laysku raacin. **[An-Nisaa': 58-61].**

فَكَيْفَ إِذَآ أَصَٰبَتْهُم مُّصِيبَةٌۢ بِمَا قَدَّمَتْ أَيْدِيهِمْ ثُمَّ جَآءُوكَ يَحْلِفُونَ بِٱللَّهِ إِنْ أَرَدْنَآ إِلَّآ إِحْسَٰنًا وَتَوْفِيقًا ﴿٦٢﴾

62. Say noqon markay ku dhacdo musiibo (dhibaato) waxay hor marsadeen gacmahoodu darteed, markaas ay kuu yimaadaan iyagoo ku dhaaran Alle inaannaan doonin waxaan wanaag iyo tawfiiq ahayn.

أُو۟لَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ يَعْلَمُ ٱللَّهُ مَا فِى قُلُوبِهِمْ فَأَعْرِضْ عَنْهُمْ وَعِظْهُمْ وَقُل لَّهُمْ فِىٓ أَنفُسِهِمْ قَوْلًۢا بَلِيغًا ﴿٦٣﴾

63. Kuwaasu waa kuwa uu og yahay Alle waxa quluubtooda ku sugan ee ka jeedso xaggooda waanina waxaadna u dhahdaa naftooda hadal xeel dheer.

وَمَآ أَرْسَلْنَا مِن رَّسُولٍ إِلَّا لِيُطَاعَ بِإِذْنِ ٱللَّهِ ۚ وَلَوْ أَنَّهُمْ إِذ ظَّلَمُوٓا۟ أَنفُسَهُمْ جَآءُوكَ فَٱسْتَغْفَرُوا۟ ٱللَّهَ وَٱسْتَغْفَرَ لَهُمُ ٱلرَّسُولُ لَوَجَدُوا۟ ٱللَّهَ تَوَّابًا رَّحِيمًا ﴿٦٤﴾

64. Umaannaan dirin rasuul in la adeeco mooyee idanka Alle, hadday markay dulmiyaan naftooda ay kuu yimaadaan oy dambi dhaaf waydiistaan Alle una dambi dhaaf waydiiyo Rasuulku waxay heli lahaayeen Alle dambi dhaafe naxariista.

فَلَا وَرَبِّكَ لَا يُؤْمِنُونَ حَتَّىٰ يُحَكِّمُوكَ
فِيمَا شَجَرَ بَيْنَهُمْ ثُمَّ لَا يَجِدُوا۟ فِىٓ
أَنفُسِهِمْ حَرَجًا مِّمَّا قَضَيْتَ وَيُسَلِّمُوا۟
تَسْلِيمًا ﴿٦٥﴾

65. Allehaa baan ku dhaartaye ma rumeeyaan intay kaaga xukuntamaan waxa dhex mara oyna ka helin naftooda dhib waxaad xukuntay, ooy hoggaansamaan hoggaansan.

Waxaa ka mid ahayd caadada munaafiqiinta inay dhib iyo xumaan ula joogaan Nabiga iyo mu'miniinta, markay musiibo ku dhacdana ay Nabiga u yimaadaan iyagoo ku dhaaran Alle inayan waxaan wanaag ahayn rabin, Alle na waa og yahay waxa quluubtooda ku sugan ee waa in la waaniyo oo laga jeedsado. Nabiyadana waxaa loo diray in lagu adeeco idanka Alle, hadayse toobad keenaan oo xaqa u noqdaan Alle waa u dhaafi lahaa, xaqana ma rumeeyaan intay uga hoggaansamaan xukunka Rasuulka wax dhib ahna ayna ka helin. **[An-Nisaa': 63-65].**

وَلَوْ أَنَّا كَتَبْنَا عَلَيْهِمْ أَنِ ٱقْتُلُوٓا۟
أَنفُسَكُمْ أَوِ ٱخْرُجُوا۟ مِن دِيَٰرِكُم مَّا
فَعَلُوهُ إِلَّا قَلِيلٌ مِّنْهُمْ ۖ وَلَوْ أَنَّهُمْ فَعَلُوا۟
مَا يُوعَظُونَ بِهِۦ لَكَانَ خَيْرًا لَّهُمْ وَأَشَدَّ
تَثْبِيتًا ﴿٦٦﴾

66. Haddaan ku faral yeello korkooda dila naftiinna ama ka baxa guryihiinna ma faleen wax yar oo ka mid ah mooyee, hadday falaan waxa lagu waanin yaa u khayr roon, kuna daran (adag) sugnaan (rumeyn).

وَإِذًا لَّءَاتَيْنَٰهُم مِّن لَّدُنَّآ أَجْرًا
عَظِيمًا ﴿٦٧﴾

67. Markaasaan ka siin lahayn agtannada ajir wayn.

وَلَهَدَيْنَٰهُمْ صِرَٰطًا مُّسْتَقِيمًا ﴿٦٨﴾

68. Waxaana ku hanuunin lahayn jid toosan.

وَمَن يُطِعِ ٱللَّهَ وَٱلرَّسُولَ فَأُو۟لَٰٓئِكَ مَعَ
ٱلَّذِينَ أَنْعَمَ ٱللَّهُ عَلَيْهِم مِّنَ ٱلنَّبِيِّـۧنَ
وَٱلصِّدِّيقِينَ وَٱلشُّهَدَآءِ وَٱلصَّٰلِحِينَ ۚ
وَحَسُنَ أُو۟لَٰٓئِكَ رَفِيقًا ﴿٦٩﴾

69. Ciddii adeecdaa Alle iyo Rasuulka kuwaasu waxay ahaan lajirka kuwuu u nicmeeyey Alle, oo ah Nabiyada, rumeeyayaasha, shuhadada iyo kuwa suubban, waxaana u fiican rafiiq kuwaas.

ذَٰلِكَ ٱلْفَضْلُ مِنَ ٱللَّهِ ۚ وَكَفَىٰ بِٱللَّهِ
عَلِيمًا ﴿٧٠﴾

70. Arrintaasuna waa fadliga Alle waxaana ogaansho ku filan Alle.

Wuxuu ka warrami Alle in haddii dadka badankiis la fari lahaa inay falaan waxay sameyn oo xumaan ah ma ayan yeeleen, wax yar mooyee, maxaa yeelay naftooda ayaa caadeysatay amar diiddada waxaase fiican inay maqlaan waxa lagu waanin, markaasuu Alle siin lahaa ajir wayn, toosinna lahaa. Ciddii Alle adeecda iyo Rasuulka wuxuu jannada la gali kuwa Alle u nicmeeyey oo ah Nabiyada, rumeeyayaasha, shuhadada iyo kuwa suubban, waana wehelka u fiican, arrintaasuna waa fadliga Alle isagaana ku filan ogaade. Rabiico binu Kacab waxaa laga wariyey inuu Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ku yidhi: wax warso, markaasuu yidhi: waxaan rabaa inaan kugula rafiiqo jannada, markaasuu yidhi: waxaas waxaan ahaynna, wuxuuna yidhi: waa intaas, markaasuu yidhi: (iigu kaalmee naftaada badinta sujuudda). Waxaa wariyey (Muslim). Taasina waxay ku tusin inay lagama maarmaan tahay in la camal falo, laguna dadaalo khayrka iyo wanaagga si loo haleelo kuwa fiican. **[An-Nisaa': 66-70].**

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ خُذُواْ حِذۡرَكُمۡ فَٱنفِرُواْ ثُبَاتٍ أَوِ ٱنفِرُواْ جَمِيعٗا ٧١

71. Kuwa (xaqa) rumeeyow qaata digtoonidiinna duulana idinkoo koox koox ah, ama duula dhammaan.

وَإِنَّ مِنكُمۡ لَمَن لَّيُبَطِّئَنَّ فَإِنۡ أَصَٰبَتۡكُم مُّصِيبَةٞ قَالَ قَدۡ أَنۡعَمَ ٱللَّهُ عَلَيَّ إِذۡ لَمۡ أَكُن مَّعَهُمۡ شَهِيدٗا ٧٢

72. Waxaa idinka mid ah (munaafiqiin) cabsiin (dib marin), hadday idinku dhacdo musiibo (dhibaato) wuxuu dhahaa waxaa ii nicmeeyey Alle korkayga maadaama aanan la joogin.

وَلَئِنۡ أَصَٰبَكُمۡ فَضۡلٞ مِّنَ ٱللَّهِ لَيَقُولَنَّ كَأَن لَّمۡ تَكُۢنۢ بَيۡنَكُمۡ وَبَيۡنَهُۥ مَوَدَّةٞ يَٰلَيۡتَنِي كُنتُ مَعَهُمۡ فَأَفُوزَ فَوۡزًا عَظِيمٗا ٧٣

73. Hadduu idin soo gaadho (heshaan) fadli Alle (khayr) wuxuu dhihi sidii isagoo ayna ahayn dhexdiinna jeceyl shallaaytee maxaan ula joogi waayay, oo liibaano liibaan wayne.

۞ فَلۡيُقَٰتِلۡ فِي سَبِيلِ ٱللَّهِ ٱلَّذِينَ يَشۡرُونَ ٱلۡحَيَوٰةَ ٱلدُّنۡيَا بِٱلۡأٓخِرَةِۚ وَمَن يُقَٰتِلۡ فِي سَبِيلِ ٱللَّهِ فَيُقۡتَلۡ أَوۡ يَغۡلِبۡ فَسَوۡفَ نُؤۡتِيهِ أَجۡرًا عَظِيمٗا ٧٤

74. Ha ku dagaallameen jidka Alle kuwa ku gaday nolosha dhaw aakhiro (doortay aakhiro) ruuxii ku dagaallama jidka Alle oo la dilo ama adkaada waxaan siinaynaa ajir wayn.

Jahaadku iyo meel marinta xaqa iyo difaaca diinta iyo dalka islaamka waa waajib sugan, iyadoo laga wada qayb qaadan, waxaase jira kuwo munaafiqiin ah oo dadka cabsi galin, marka dhib dhacana yidhaahda Allaan i raacinnin, marka guul la helana yidhaahda maxaan ula joogi waayay. Waxayna ku tusin aayaddu wanaagga Alle u darbay cidda lagu dilo jahaadka ama adkaata, taasoo ku tusin inaan laga adkaanayn muslimiinta markay kulmistaan iimaan dhab ah, isku duubni iyo u diyaargarow, hase yeeshee markay xaqa ka leexdaan oo kala tagaan sida muuqata ayaamahan waxaa ku dhiirran cadawgooda oo ka adkaan, waase inay is gaadhaan intay goori goor tahay. **[An-Nisaa': 71-74].**

75. Maxaad ugu dagaallami weydeen jidka Alle iyo in la soo furto kuwa la daciifsan (tabarta yar), oo rag, haween, iyo carruurba leh, kuwaasoo oranaya: Allow naga bixi magaaladan dadkeedu ay daalimiinta yihiin, agtaadana nooga yeel wali (taladeenna qabta oo dhibka gaalada nooga fillaada) iyo mid nooga hiilliya (kuwan daalimiinta ah).

وَمَا لَكُمْ لَا تُقَٰتِلُونَ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ وَٱلْمُسْتَضْعَفِينَ مِنَ ٱلرِّجَالِ وَٱلنِّسَآءِ وَٱلْوِلْدَٰنِ ٱلَّذِينَ يَقُولُونَ رَبَّنَآ أَخْرِجْنَا مِنْ هَٰذِهِ ٱلْقَرْيَةِ ٱلظَّالِمِ أَهْلُهَا وَٱجْعَل لَّنَا مِن لَّدُنكَ وَلِيًّا وَٱجْعَل لَّنَا مِن لَّدُنكَ نَصِيرًا ﴿٧٥﴾

76. Kuwa (xaqa) rumeeyey waxay ku dagaallami jidka Alle, kuwa gaaloobayna waxay ku dagaallami jidka shaydaanka, ee la dagaallama sokeeyaha shaydaanka, dhagarta shaydaanku waa tabar yar tahaye.

ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ يُقَٰتِلُونَ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ ۖ وَٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ يُقَٰتِلُونَ فِى سَبِيلِ ٱلطَّٰغُوتِ فَقَٰتِلُوٓا۟ أَوْلِيَآءَ ٱلشَّيْطَٰنِ ۖ إِنَّ كَيْدَ ٱلشَّيْطَٰنِ كَانَ ضَعِيفًا ﴿٧٦﴾

77. Ka warran kuwa loo yidhi reeba gacmihiinna (billoowgii islaamka) oogana salaadda, bixiyana zakada, markii lagu faral yeelay dagaalkana waxaa soo baxay koox ka mid ah oo uga cabsan dadka cabsida Alle oo kale ama ka daran, waxayna

أَلَمْ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ قِيلَ لَهُمْ كُفُّوٓا۟ أَيْدِيَكُمْ وَأَقِيمُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ وَءَاتُوا۟ ٱلزَّكَوٰةَ فَلَمَّا كُتِبَ عَلَيْهِمُ ٱلْقِتَالُ إِذَا فَرِيقٌ مِّنْهُمْ يَخْشَوْنَ ٱلنَّاسَ كَخَشْيَةِ ٱللَّهِ أَوْ أَشَدَّ خَشْيَةً ۚ وَقَالُوا۟ رَبَّنَا لِمَ كَتَبْتَ عَلَيْنَا ٱلْقِتَالَ لَوْلَآ أَخَّرْتَنَآ

إِلَىٰٓ أَجَلٖ قَرِيبٖۗ قُلۡ مَتَٰعُ ٱلدُّنۡيَا قَلِيلٞ وَٱلۡأٓخِرَةُ خَيۡرٞ لِّمَنِ ٱتَّقَىٰ وَلَا تُظۡلَمُونَ فَتِيلًا ٧٧

dhaheen Allow maxaad noogu faral yeeshay dagaalka, maxaad dib noogu dhigi wayday tan iyo muddo dhaw, waxaad dhahdaa: raaxada adduunyo waa yar tahay, aakhiraana u khayr roon ciddii dhawrsan laydinkama dulmiyo fatiil (waxa ku dheggan jeex laftimireed) oo kale (wax yar).

Aayaduhu waxay ku boorrin muslimiinta inay jahaadaan oo dagaallamaan mar hadday muslimiin rag, haween iyo carruurba leh oo tabar yar jiraan lana dullaysan, dagaalkuna waa mid xaq ah oo dar Alle ah iyo mid xaq darro oo jid shaydaan ah, waana in lala dagaallamo gargaaraha shaydaanka, waana tabar yar yahay, mana aha in lagu dagdago dagaalka ee waa in cibaadada la badiyo lana adkaysto jahaadka, cabsida dhabta ahna laga cabsadaa Alle, lana ogaado inay nolosha adduun tahay wax yar oo tagi. Xasan Basri wuxuu yidhi: Alle ha u naxariisto addoon kula noolaaday adduunyada qadarkeeda, adduunyana ma aha bilowgeed iyo dhammaadkeed waxaan ahayn ruux seexday oo ku arkay hurdada wuxuu jecel yahay soona baraarugay. **[An-Nisaa': 75-77].**

أَيۡنَمَا تَكُونُواْ يُدۡرِككُّمُ ٱلۡمَوۡتُ وَلَوۡ كُنتُمۡ فِي بُرُوجٖ مُّشَيَّدَةٖۗ وَإِن تُصِبۡهُمۡ حَسَنَةٞ يَقُولُواْ هَٰذِهِۦ مِنۡ عِندِ ٱللَّهِۖ وَإِن تُصِبۡهُمۡ سَيِّئَةٞ يَقُولُواْ هَٰذِهِۦ مِنۡ عِندِكَۚ قُلۡ كُلّٞ مِّنۡ عِندِ ٱللَّهِۖ فَمَالِ هَٰٓؤُلَآءِ ٱلۡقَوۡمِ لَا يَكَادُونَ يَفۡقَهُونَ حَدِيثٗا ٧٨

78. Meeshaad ahaataanba wuu idin haleeli mawdku (geeridu) aad ahaateenba daaro dheerdheer oo la adkeeyey dhexdeeda, hadday taabato wanaag waxay dhahaan tani waxay ka timid xaga Alle, hadday ku dhacdo xumaanna waxay dhahaan tani waxay ka timid agtaada (Nabiga), waxaad dhahdaa dhammaan waxay ka ahaadeen Alle agtiisa, maxaa u sugnaaday qoomkaas uma dhawa inay fahmaan hadale.

مَّآ أَصَابَكَ مِنۡ حَسَنَةٖ فَمِنَ ٱللَّهِۖ وَمَآ أَصَابَكَ مِن سَيِّئَةٖ فَمِن نَّفۡسِكَۚ

79. Wixii ku soo gaadha oo wanaaga waxay ka ahaadeen Alle, wixii kugu dhaca oo xumaan ahna

وَأَرْسَلْنَٰكَ لِلنَّاسِ رَسُولًا ۚ وَكَفَىٰ بِٱللَّهِ شَهِيدًا ﴿٧٩﴾

waxay ka ahaatay naftaada, waana kuu dirray dadka adoo rasuul ah, wuuna ku filan yahay Alle marag.

مَّن يُطِعِ ٱلرَّسُولَ فَقَدْ أَطَاعَ ٱللَّهَ ۖ وَمَن تَوَلَّىٰ فَمَآ أَرْسَلْنَٰكَ عَلَيْهِمْ حَفِيظًا ﴿٨٠﴾

80. Ruuxii adeeca Rasuulka wuxuu dhab u adeecay Alle, ruuxii jeedsadana kuugu maannaan dirin ilaaliye.

وَيَقُولُونَ طَاعَةٌ فَإِذَا بَرَزُوا۟ مِنْ عِندِكَ بَيَّتَ طَآئِفَةٌ مِّنْهُمْ غَيْرَ ٱلَّذِى تَقُولُ ۖ وَٱللَّهُ يَكْتُبُ مَا يُبَيِّتُونَ ۖ فَأَعْرِضْ عَنْهُمْ وَتَوَكَّلْ عَلَى ٱللَّهِ ۚ وَكَفَىٰ بِٱللَّهِ وَكِيلًا ﴿٨١﴾

81. Waxay dhihi (munaafiqiintu) daacad (baan nahay) markay ka tagaan agtaadana waxay maamulaan (habeenkii) koox ka mid ahi waxay ku hadlayaan waxaan ahayn, Alle na wuu qori waxay maamuli (miri) ee ka jeedso xaggooda talana saaro Alle, waxaana ku filan wakiil Alle.

Meel kastoo la joogo waa la dhiman si kasta ha laysu ilaaliyo ama guryo adag ha la galee, wax kastana waxay ku hoos jiraan awoodda Alle ee ma aha in gaaladu xumaanta iyo musiibada u tiiriyaan Nabiga, waxaase jirta in dadka laga abaal mariyo waxay kasbadeen khayr iyo sharba. Rasuulkana wuxuu Alle u diray dadka, eebbaase wakiil ilaaliye ah ugu filan dadka. Ruuxii adeeca oo raaca rasuulka wuxuu adeecay Alle, ruuxii jeedsadase waxba Nabiga kama saarra, waana munaafaqnimo in la muujisto xaqrumayn, markii la fogaadana la diido xaqa oo wax kale la falo, Allaase arka kuwaas oo abaal marin. **[An-Nisaa': 78-81].**

أَفَلَا يَتَدَبَّرُونَ ٱلْقُرْءَانَ ۚ وَلَوْ كَانَ مِنْ عِندِ غَيْرِ ٱللَّهِ لَوَجَدُوا۟ فِيهِ ٱخْتِلَٰفًا كَثِيرًا ﴿٨٢﴾

82. Miyeyna fiirfiirinayn quraanka, hadduu ka yimid Alle agtiisa meelaan ahayn waxay ka heli lahaayeen dhexdiisa is khilaaf badan.

وَإِذَا جَآءَهُمْ أَمْرٌ مِّنَ ٱلْأَمْنِ أَوِ ٱلْخَوْفِ أَذَاعُوا۟ بِهِۦ ۖ وَلَوْ رَدُّوهُ إِلَى ٱلرَّسُولِ

83. Markuu u yimaaddo amar nabadgalya ah ama cabsi way faafiyaan, hadday u celiyaan

وَإِلَىٰٓ أُوْلِي ٱلْأَمْرِ مِنْهُمْ لَعَلِمَهُ ٱلَّذِينَ يَسْتَنۢبِطُونَهُۥ مِنْهُمْ ۗ وَلَوْلَا فَضْلُ ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَتُهُۥ لَٱتَّبَعْتُمُ ٱلشَّيْطَٰنَ إِلَّا قَلِيلًا ﴿٨٣﴾

xagga Rasuulka ama kuwa maamula iyaga ama cilmiga leh, oo ka mid ah, waxaa ogaan lahaa kuwa la soo baxa (dhabta) oo ka mid ah ayaga, hadduusan jirin fadliga Alle ee korkiinna iyo naxariistiisa waad raaci lahaydeen shaydaan wax yar mooyee.

فَقَٰتِلْ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ لَا تُكَلَّفُ إِلَّا نَفْسَكَ ۚ وَحَرِّضِ ٱلْمُؤْمِنِينَ ۖ عَسَى ٱللَّهُ أَن يَكُفَّ بَأْسَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ ۚ وَٱللَّهُ أَشَدُّ بَأْسًا وَأَشَدُّ تَنكِيلًا ﴿٨٤﴾

84. Ee ku dagaallan jidka Alle lagugumana mashaqayn naftaada mooyee, kuna boorri mu'miniinta (dagaalka) wuxuu u dhaw yahay Alle inuu idinka reebo dhibka kuwa gaaloobay, Allaana daran dhibid, daranna xanuujin.

مَّن يَشْفَعْ شَفَٰعَةً حَسَنَةً يَكُن لَّهُۥ نَصِيبٌ مِّنْهَا ۖ وَمَن يَشْفَعْ شَفَٰعَةً سَيِّئَةً يَكُن لَّهُۥ كِفْلٌ مِّنْهَا ۗ وَكَانَ ٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ مُّقِيتًا ﴿٨٥﴾

85. Ruuxii ergeeya ergeyn wanaagsan waxaa u ahaada qayb ka mid ah, ruuxiise ergeeya ergeyn xun waxaa u ahaan dambi ka mid ah, Allaana wax kasta ilaaliya.

Wuxuu farayaa Alle in quraanka si fiican loo fiiriyo, lana kaso macnihiisa, illeen xagga Alle ayuu ka ahaadaye, wax is burin ahna kuma jirto sida hadallada kale, markay arrin muhiim ah soo daristana waxaa Alle faray in loo celiyo Rasuulka iyo kuwa u cilmi leh, shaydaanna laga digtoonaado, jidka Allana lagu jahaado, cid walbana waxay la kulmi shafeecadeeda abaalkeedii samaan iyo xumaanba. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: waxaa uun halaagay ummadihii idin ka horreeyay isku khilaafkii kitaabkoodii. Mar kalana wuxuu yidhi: waxaa ugu filan ruux been inuu ka sheekeeyo wuxuu maqlay oo dhan. **[An-Nisaa': 82-85].**

وَإِذَا حُيِّيتُم بِتَحِيَّةٍ فَحَيُّوا۟ بِأَحْسَنَ مِنْهَآ أَوْ رُدُّوهَآ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ حَسِيبًا ﴿٨٦﴾

86. Haddii laydin salaamo salaan ku salaama mid ka fiican ama ku celiya (mid la mid ah) Alle na waa wax kasta xisaabiye (kaafiye).

87. Alle, macbuud xaq lugu caabudo ma jiro isaga mooyee. Wuuna idiin soo kulmin maalinta qiyaame, shaki ma leh, yaa ka run badan Alle hadal (ma jiro).

ٱللَّهُ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ۚ لَيَجْمَعَنَّكُمْ إِلَىٰ يَوْمِ ٱلْقِيَٰمَةِ لَا رَيْبَ فِيهِ ۗ وَمَنْ أَصْدَقُ مِنَ ٱللَّهِ حَدِيثًا ﴿٨٧﴾

88. Maxaad leedihiin (mu'miniinta) ood munaafiqiinta laba kooxood ugu noqoteen (in la laayo iyo in kale) Alle wuu halaagay (oo u celiyey gaalnimo) waxay kasbadeen dartiis, ma waxaad doonaysaan inaad hanuunisaan cidduu dhumiyey Alle, ruuxuu dhumiyo Alle na uma heshid waddo (hanuun).

* فَمَا لَكُمْ فِى ٱلْمُنَٰفِقِينَ فِئَتَيْنِ وَٱللَّهُ أَرْكَسَهُم بِمَا كَسَبُوٓا۟ ۚ أَتُرِيدُونَ أَن تَهْدُوا۟ مَنْ أَضَلَّ ٱللَّهُ ۗ وَمَن يُضْلِلِ ٱللَّهُ فَلَن تَجِدَ لَهُۥ سَبِيلًا ﴿٨٨﴾

89. Waxay jecel yihiin (munaafiqiintu) inaad gaaloowdaan siday u gaaloobeen ood isku mid noqotaan, ha ka yeelannina xaggooda sokeeye intay uga hijroodaan jidka Alle, haddayse jeedsadaan qabta oo ku dila meeshaad ka heshaanba, hana ka yeelannina xaggooda sokeeye iyo gargaare (midna).

وَدُّوا۟ لَوْ تَكْفُرُونَ كَمَا كَفَرُوا۟ فَتَكُونُونَ سَوَآءً ۖ فَلَا تَتَّخِذُوا۟ مِنْهُمْ أَوْلِيَآءَ حَتَّىٰ يُهَاجِرُوا۟ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ ۚ فَإِن تَوَلَّوْا۟ فَخُذُوهُمْ وَٱقْتُلُوهُمْ حَيْثُ وَجَدتُّمُوهُمْ ۖ وَلَا تَتَّخِذُوا۟ مِنْهُمْ وَلِيًّا وَلَا نَصِيرًا ﴿٨٩﴾

90. Kuwa gaadhi qoom dhexdiinna iyo dhexdooda ballan (heshiis) yahay mooyee, ama idiin yimid iyadoo ay ka cidhiidhyan tahay laabtoodu inay idinla dagaallamaan ama la dagaallamaan qoomkooda, hadduu doono Alle wuu idinku diri lahaa wayna idin la daggallami lahaayeen, haddayse

إِلَّا ٱلَّذِينَ يَصِلُونَ إِلَىٰ قَوْمٍۭ بَيْنَكُمْ وَبَيْنَهُم مِّيثَٰقٌ أَوْ جَآءُوكُمْ حَصِرَتْ صُدُورُهُمْ أَن يُقَٰتِلُوكُمْ أَوْ يُقَٰتِلُوا۟ قَوْمَهُمْ ۚ وَلَوْ شَآءَ ٱللَّهُ لَسَلَّطَهُمْ عَلَيْكُمْ فَلَقَٰتَلُوكُمْ ۚ فَإِنِ ٱعْتَزَلُوكُمْ فَلَمْ يُقَٰتِلُوكُمْ وَأَلْقَوْا۟ إِلَيْكُمُ ٱلسَّلَمَ فَمَا جَعَلَ ٱللَّهُ لَكُمْ عَلَيْهِمْ سَبِيلًا ﴿٩٠﴾

idinka dheeraadaan oyan idin la dagaallamin oy idiin soo hormariyaan nabadgalyo idiin ma yeelin Alle korkooda jid (xaq kuma lihidiin dagaalkooda).

Salaantu waa calaamadda muslimiinta. Ruuxii ku salaamana waa inaad u celisaa mid ka fiican ama la mid ah. Qiyaamana waa la kulmi, Allana waa run badane, mana aha in gaalada lala kala safto ama laysku khilaafo xaalkooda, iyaguba waxay jecel yihiin in muslimiintu gaalowdo siday iyagu u gaaloobeen, hana ka yeelannina sokeeye iyo gargaare midna. Kuwiise la nool kuwo aad ballan leedihiin ama idinla dagaallamin nabad galiya, ciddii idin nabad galisa nabad galiya, tii idinla col ahna la dagaallama, waana taas caddaaladda iyo wanaagga islaamku, dagaallan ma jecla. **[An-Nisaa': 86-90].**

سَتَجِدُونَ ءَاخَرِينَ يُرِيدُونَ أَن يَأۡمَنُوكُمۡ وَيَأۡمَنُواْ قَوۡمَهُمۡ كُلَّ مَا رُدُّوٓاْ إِلَى ٱلۡفِتۡنَةِ أُرۡكِسُواْ فِيهَاۚ فَإِن لَّمۡ يَعۡتَزِلُوكُمۡ وَيُلۡقُوٓاْ إِلَيۡكُمُ ٱلسَّلَمَ وَيَكُفُّوٓاْ أَيۡدِيَهُمۡ فَخُذُوهُمۡ وَٱقۡتُلُوهُمۡ حَيۡثُ ثَقِفۡتُمُوهُمۡۚ وَأُوْلَٰٓئِكُمۡ جَعَلۡنَا لَكُمۡ عَلَيۡهِمۡ سُلۡطَٰنٗا مُّبِينٗا ٩١

91. Waxaad helaysaan kuwa kale oo dooni inay idinka nabad galaan, oo ka nabad galaan qoomkooda (daahirka) markastoo loo celiyo gaalnimana waa lagu dedejiyaa dhexdiisa, haddayna idinka dheeraan ooyan idin siinnin nabadgalyo ooyan idinka reebin gacmahooda qabta oo ku dila meeshaad ka heshaanba, kuwaasna waxaan idiin siinnay xujo cad (layntooda).

وَمَا كَانَ لِمُؤۡمِنٍ أَن يَقۡتُلَ مُؤۡمِنًا إِلَّا خَطَـٔٗاۚ وَمَن قَتَلَ مُؤۡمِنًا خَطَـٔٗا فَتَحۡرِيرُ رَقَبَةٖ مُّؤۡمِنَةٖ وَدِيَةٞ مُّسَلَّمَةٌ إِلَىٰٓ أَهۡلِهِۦٓ إِلَّآ أَن يَصَّدَّقُواْۚ فَإِن كَانَ مِن قَوۡمٍ عَدُوّٖ لَّكُمۡ وَهُوَ مُؤۡمِنٞ فَتَحۡرِيرُ رَقَبَةٖ مُّؤۡمِنَةٖۖ وَإِن كَانَ مِن قَوۡمِۭ بَيۡنَكُمۡ وَبَيۡنَهُم مِّيثَٰقٞ فَدِيَةٞ مُّسَلَّمَةٌ إِلَىٰٓ أَهۡلِهِۦ

92. Uma habboona (bannaana) ruux mu'min ah inuu dilo mu'min si gaf ah mooyee, ruuxii u dila mu'min gaf waxaa saaran xorayn qoor mu'min, iyo mag la siiyo ehelkiisii, inay sadaqaystaan moyee, hadduu ka mid yahay qoom aad col tihiin isna mu'min yahay waxaa saaran xorayn qoor mu'min, hadduu

ka mid yahay qoom ballan idin dhexyaal waxaa saaran mag la siiyo ehelkiisii iyo xorayn qoor mu'min ah, hadduusan helin (qoorna) wuxuu soomi laba bilood oo israac raacsan, waana toobad Alle, Alle na waa oge falsan.

وَتَحۡرِيرُ رَقَبَةٖ مُّؤۡمِنَةٖۖ فَمَن لَّمۡ يَجِدۡ فَصِيَامُ شَهۡرَيۡنِ مُتَتَابِعَيۡنِ تَوۡبَةٗ مِّنَ ٱللَّهِۗ وَكَانَ ٱللَّهُ عَلِيمًا حَكِيمٗا ٩٢

93. Ruuxii u dila mu'min si kas ah, abaalkiisu waa jahannamo oos ku waari dhexdeeda, wuuna u cadhoon Alle wuuna lacnadi wuxuu u diyaariyay cadaab wayn.

وَمَن يَقۡتُلۡ مُؤۡمِنٗا مُّتَعَمِّدٗا فَجَزَآؤُهُۥ جَهَنَّمُ خَٰلِدٗا فِيهَا وَغَضِبَ ٱللَّهُ عَلَيۡهِ وَلَعَنَهُۥ وَأَعَدَّ لَهُۥ عَذَابًا عَظِيمٗا ٩٣

Waxaa jirta munaafiqiin ku gabban islaamka jecelse gaalnimada kuwaas haddayna nabadgalinnin muslimiinta waa in layska celiyo. Aayadaha kale waxay ka warrami inayan banaanayn in naf mu'min loo dilo xaq darro, ciddiise si gaf ah u disha waxaa saaran xorayn qoor iyo mag la siiyo ehelkiisa, haddii la waayana soon laba bilood oo is raac raacsan, waa toobad fiican, ciddiise u kas u disha si xaq darro ah ruux mu'min ah abaalkiisu waa jahannamoos ku waaro, cadho iyo lacnad Alle iyo cadaab wayn, maxaa yeelay ma fududa nafta muslimku ee waa qaali mana bannaana in lagu xad gudbo. Waxaa sugnaatay: adduunkoo taga (rogmada) yaa ka sahlan Alle agtiisa dil ruux muslim ah, mar kalana wuxuu yidhi Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): hadday u kulmaan waxa samaawaadka iyo dhulka ku sugan inay dilaan muslim wuxuu Alle ku tuuri lahaa naarta. Taasina waxay ku tusin sida islaamku u dhawray xuquuqda dadka iyo noloshiisa, iyo qaalinnimada iyo sharafta muslimka mar hadduu ka wayn yahay adduunka oo dhan iyo waxa ku sugan. **[An-Nisaa': 91-93].**

94. Kuwa xaqa rumeeyow markaad u safartaan jidka Alle wax caddaysta (hubsada) hana dhihina ruux salaan idiin soo gudbiyey ma tihid mu'min idinkoo dooni dhalanteedka nolosha dhaw, Alle agtiisa yey

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِذَا ضَرَبۡتُمۡ فِي سَبِيلِ ٱللَّهِ فَتَبَيَّنُواْ وَلَا تَقُولُواْ لِمَنۡ أَلۡقَىٰٓ إِلَيۡكُمُ ٱلسَّلَٰمَ لَسۡتَ مُؤۡمِنٗا تَبۡتَغُونَ عَرَضَ ٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَا فَعِندَ ٱللَّهِ مَغَانِمُ كَثِيرَةٞۚ كَذَٰلِكَ كُنتُم مِّن قَبۡلُ

tahay qaniimooyin badan, saasaad ahaydeen horay, waxaana idinku galladaystay Alle, ee caddaysta (hubsada), Allana waxaad camal falaysaan waa og yahay.

فَمَنَّ ٱللَّهُ عَلَيْكُمْ فَتَبَيَّنُوٓاْ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرًا ﴿٩٤﴾

95. Ma sinna kuwa fadhiya ee mu'miniinta ah oon kuwa dhibban ahayn iyo kuwa kula jahaadi jidka Alle xoolahooda iyo naftooda, wuu ka fadilay Alle kuwa ku jahaaday xoolahooda iyo naftooda kuwa fadhiya darajo, dhammaanna wuxuu u yaboohay wanaag, wuuna kaga fadilay Alle kuwa jahaaday kuwa fadhiya ajir wayn.

لَّا يَسْتَوِى ٱلْقَٰعِدُونَ مِنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ غَيْرُ أُوْلِى ٱلضَّرَرِ وَٱلْمُجَٰهِدُونَ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ بِأَمْوَٰلِهِمْ وَأَنفُسِهِمْ ۚ فَضَّلَ ٱللَّهُ ٱلْمُجَٰهِدِينَ بِأَمْوَٰلِهِمْ وَأَنفُسِهِمْ عَلَى ٱلْقَٰعِدِينَ دَرَجَةً ۚ وَكُلًّا وَعَدَ ٱللَّهُ ٱلْحُسْنَىٰ ۚ وَفَضَّلَ ٱللَّهُ ٱلْمُجَٰهِدِينَ عَلَى ٱلْقَٰعِدِينَ أَجْرًا عَظِيمًا ﴿٩٥﴾

96. Waa darajooyin xaggiisa ah iyo dambidhaaf iyo naxariis, Allana waa dambi dhaafe naxariiista.

دَرَجَٰتٍ مِّنْهُ وَمَغْفِرَةً وَرَحْمَةً ۚ وَكَانَ ٱللَّهُ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿٩٦﴾

Aayadahanna waxay caddayn inaan lagu dag dagin dilka dadka hadday islaannimo muujiyaan iyadoo la dooni in xaqooda la bannaysto, illeen cid walba marbay dhunsanayd Allaana hanuuniyee, iyo inayna ekeyn mu'miniinta cudur la'aan ka fadhiista jahaadka iyo kuwa ku jahaada xoolahooda iyo naftooda jidka Alle, wuxuu Alle ka fadilay kuwa ku jahaada jidka Alle kuwa ka fadhiista, in kasta oo mu'min dhammaantiis Alle wanaag u diyaariyay, hadana wuxuu Alle siin kuwa jidkiisa ku jahaada darajooyin waawayn, dambi dhaaf iyo naxariis. Waxayna ku tusin aayaduhu in wax la hubsado een lagu dag dagin ciddaan la hubin gaalnimadiisa, iyo in jidka Alle ku jahaadkiisu leeyahay fadli iyo ajir wayn. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgayo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: jannada waxaa ah boqol darajo oo Alle u diyaariyay kuwa ku jahaada jidkiisa, labadii darajana waxaa u dhaxaysa inta u dhaxaysa cirka iyo dhulka, wakaas fadliga jahaadka, waa cisiga iyo sharafta mu'miniinta iyagoon cidna dulmiyeyn, markayse ka tageen jahaadka waa kuwaas dulloobay ee la addoonsaday ee la qaybsaday iyagoo dhulkoodii laga xoogay lagana saaray. **[An-Nisaa': 94-96].**

إِنَّ ٱلَّذِينَ تَوَفَّىٰهُمُ ٱلْمَلَٰٓئِكَةُ ظَالِمِىٓ أَنفُسِهِمْ قَالُوا۟ فِيمَ كُنتُمْ ۖ قَالُوا۟ كُنَّا مُسْتَضْعَفِينَ فِى ٱلْأَرْضِ ۚ قَالُوٓا۟ أَلَمْ تَكُنْ أَرْضُ ٱللَّهِ وَٰسِعَةً فَتُهَاجِرُوا۟ فِيهَا ۚ فَأُو۟لَٰٓئِكَ مَأْوَىٰهُمْ جَهَنَّمُ ۖ وَسَآءَتْ مَصِيرًا ﴿٩٧﴾

97. Kuway oofsato malaa'igtu iyagoo dulmiyey naftooda waxay ku dhahaan maxaad ku sugnaydeen (diin ahaan), waxayna dhahaan waxaan ahayn kuwo lagu daciifsaday dhulka (tabar yar), waxayna dhahaan (malaa'igtii) miyuuna ahayn dhulka Alle waasac ood ku hijrootaan dhexdiisa, kuwaas hooygoodu waa jahanamo wayna u xun tahay aaye.

إِلَّا ٱلْمُسْتَضْعَفِينَ مِنَ ٱلرِّجَالِ وَٱلنِّسَآءِ وَٱلْوِلْدَٰنِ لَا يَسْتَطِيعُونَ حِيلَةً وَلَا يَهْتَدُونَ سَبِيلًا ﴿٩٨﴾

98. Kuwa la daciifsado oo ah rag, haween iyo carruur oon tabar lahayn kuna toosi karin jidka mooyee.

فَأُو۟لَٰٓئِكَ عَسَى ٱللَّهُ أَن يَعْفُوَ عَنْهُمْ ۚ وَكَانَ ٱللَّهُ عَفُوًّا غَفُورًا ﴿٩٩﴾

99. Kuwaas wuxuu u dhaw yahay Alle inuu iska cafiyo xaggooda, Alle na waa saamaxe dhaafa (dambiga).

* وَمَن يُهَاجِرْ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ يَجِدْ فِى ٱلْأَرْضِ مُرَٰغَمًا كَثِيرًا وَسَعَةً ۚ وَمَن يَخْرُجْ مِنۢ بَيْتِهِۦ مُهَاجِرًا إِلَى ٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ ثُمَّ يُدْرِكْهُ ٱلْمَوْتُ فَقَدْ وَقَعَ أَجْرُهُۥ عَلَى ٱللَّهِ ۗ وَكَانَ ٱللَّهُ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿١٠٠﴾

100. Ruuxii ku hijrooda jidka Alle wuxuu ka heli dhulka magangal badan iyo waasacnimo, ruuxii ka baxa gurigiisa isagoo u hijroon xagga Alle iyo Rasuulkiisa markaas uu haleelo mawdku (geeridu) wuxuu ku sugnaaday ajrigiisu Alle (fadli dartiis). Alle na waa (dambi) dhaafe naxariista.

Diinta islaamku ma oggola inay ku dullaysato gaalo adoo muslim ah, maxaa yeelay waa laga fogaan karaa si loogu darbado jahaadkooda siday faleen muslimiintii hore, hase yeeshee dadka tabarta yar ee ah rag, haween iyo carruurba dhib ma saarra hadday ku dhex noolaadaan, Alle na wuxuu u dhaw yahay inuu iska saamaxo, ruuxiise dar Alle u hijrooda wuxuu ka heli dhulka khayr iyo waasacnimo, ciddii ka baxda gurigeeda iyadoo u hijroon dar Alle iyo

Rasuulka oo dhinta kuwaas Alle ayaa ajir iyo wanaag ku abaal marin. Taasina waxay ku tusin inay waajib tahay in la wanaajiyo niyada, siduu Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) uu yidhi: camalku waa uun niyo cid walbana waxay mudan waxay niyooto. Tan kale waa inaan muslim qaadannin dullaynta gaalada, uuna dulliga gaalada ka baxo si kasta oo suurowda oo hijro iyo ka durkid ah, isagoo la jahaadi. **[An-Nisaa': 97-100]**

وَإِذَا ضَرَبْتُمْ فِي ٱلْأَرْضِ فَلَيْسَ
عَلَيْكُمْ جُنَاحٌ أَن تَقْصُرُوا۟ مِنَ
ٱلصَّلَوٰةِ إِنْ خِفْتُمْ أَن يَفْتِنَكُمُ ٱلَّذِينَ
كَفَرُوٓا۟ ۚ إِنَّ ٱلْكَٰفِرِينَ كَانُوا۟ لَكُمْ
عَدُوًّا مُّبِينًا ﴿١٠١﴾

101. Haddaad ku safartaan dhulka ma aha korkiinna dhib (dambi) inaad gaabisaan salaadda haddaad ka cabsataan inay idin fidmeeyaan (dhibaan) kuwa gaaloobay, gaaladuna waxay idiin yihiin col cad.

وَإِذَا كُنتَ فِيهِمْ فَأَقَمْتَ لَهُمُ ٱلصَّلَوٰةَ
فَلْتَقُمْ طَآئِفَةٌ مِّنْهُم مَّعَكَ وَلْيَأْخُذُوٓا۟
أَسْلِحَتَهُمْ ۖ فَإِذَا سَجَدُوا۟ فَلْيَكُونُوا۟
مِن وَرَآئِكُمْ وَلْتَأْتِ طَآئِفَةٌ أُخْرَىٰ
لَمْ يُصَلُّوا۟ فَلْيُصَلُّوا۟ مَعَكَ وَلْيَأْخُذُوا۟
حِذْرَهُمْ وَأَسْلِحَتَهُمْ ۗ وَدَّ ٱلَّذِينَ
كَفَرُوا۟ لَوْ تَغْفُلُونَ عَنْ أَسْلِحَتِكُمْ
وَأَمْتِعَتِكُمْ فَيَمِيلُونَ عَلَيْكُم
مَّيْلَةً وَٰحِدَةً ۚ وَلَا جُنَاحَ عَلَيْكُمْ إِن
كَانَ بِكُمْ أَذًى مِّن مَّطَرٍ أَوْ كُنتُم
مَّرْضَىٰٓ أَن تَضَعُوٓا۟ أَسْلِحَتَكُمْ ۖ وَخُذُوا۟
حِذْرَكُمْ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ أَعَدَّ لِلْكَٰفِرِينَ عَذَابًا
مُّهِينًا ﴿١٠٢﴾

102. Markaad tahay dhexdooda muslimiinta ood u oogto salaadda ha kula tukato koox ka mid ah, hana qaateen hubkooda, markay sujuudaan ha ahaadeen gadaashiinna, hana timaado koox kale oon tukannin hana tukadeen la jirkaaga hana qaateen digtoonidooda iyo hubkooda, waxay jecel yihiin kuwa gaaloobay inaad halmaantaan hubkiinna iyo alaabtiinna oo markaas ay idin soo weeraraan mar kaliya (idinku kadiyaan), korkiinna ma aha dhib hadduu idin hayo dhib roob ah ama aad tihiin kuwa buka inaad dajisaan hubka, qaatana digtoonidiinna, Alle na wuxuu u diyaariyey gaalada cadaab wax dulleeya.

Aayadda hore waxay ka warrami inay banaan tahay gaabinta salaadda marka socotada la yahay, taasoo ah in duhurka, casarka iyo cishaha labo labo laga tukado, waana naxariis Alle iyo fududayn. Aayadda kale waxay ka warrami salaadda waqtiga dagaalka iyo sida loo tukan, oo ah in qoonna tukan qoonna ilaalin colka iyagoo hubka haysta. Taasina waxay ku tusin waynida salaadda iyo jameecaadka iyo inaan laga tagayn, tan kale waxay ku tusin ahmiyadda jahaadka iyo diyaargarowga. Arrinta salaadda dagaalka iyo cabsida waxay ku faah faahsan tahay kutubaha, waxaase muhiim ah in la ogaado waynideeda iyo waajibnimadeeda. **[An-Nisaa': 101-102].**

فَإِذَا قَضَيْتُمُ ٱلصَّلَوٰةَ فَٱذْكُرُوا۟ ٱللَّهَ قِيَـٰمًا وَقُعُودًا وَعَلَىٰ جُنُوبِكُمْ ۚ فَإِذَا ٱطْمَأْنَنتُمْ فَأَقِيمُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ ۚ إِنَّ ٱلصَّلَوٰةَ كَانَتْ عَلَى ٱلْمُؤْمِنِينَ كِتَـٰبًا مَّوْقُوتًا ﴿١٠٣﴾

103. Markaad gudataan salaadda ku xusa Alle taagni, fadhi iyo dhiniciinaba (jiif) markaad xasishaanna (aamin noqotaan) ooga salaadda (dhammeeya), salaaddu waxay ku tahay mu'miniinta xukun waqtiyeysan (muddaysan).

وَلَا تَهِنُوا۟ فِى ٱبْتِغَآءِ ٱلْقَوْمِ ۖ إِن تَكُونُوا۟ تَأْلَمُونَ فَإِنَّهُمْ يَأْلَمُونَ كَمَا تَأْلَمُونَ ۖ وَتَرْجُونَ مِنَ ٱللَّهِ مَا لَا يَرْجُونَ ۗ وَكَانَ ٱللَّهُ عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿١٠٤﴾

104. Haka daciifina (jilcina) doonidda qoomka (gaalada) haddaad tihiin kuwa xanuunsan iyaguba way xanuunsan sidaad u xanuunsanaysaan, waxaadna ka rajaynaysaan Alle waxayna ka rajaynayn, Alle na waa oge falsan.

إِنَّآ أَنزَلْنَآ إِلَيْكَ ٱلْكِتَـٰبَ بِٱلْحَقِّ لِتَحْكُمَ بَيْنَ ٱلنَّاسِ بِمَآ أَرَىٰكَ ٱللَّهُ ۚ وَلَا تَكُن لِّلْخَآئِنِينَ خَصِيمًا ﴿١٠٥﴾

105. Annagaa kugu soo dajinnay kitaabka si xaq ah si aad ugu kala xukunto dadka dhexdiisa wuxuu ku tusiyo Alle, hana u noqonin khaa'imiinta mid u dooda.

وَٱسْتَغْفِرِ ٱللَّهَ ۖ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿١٠٦﴾

106. Dambi dhaaf warso Alle, Ilaahay waa dambi dhaafe naxariista.

وَلَا تُجَٰدِلْ عَنِ ٱلَّذِينَ يَخْتَانُونَ أَنفُسَهُمْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُحِبُّ مَن كَانَ خَوَّانًا أَثِيمًا ﴿١٠٧﴾

107. Ha ka doodin kuwa naftooda ku khiyaanay (macsida Alle), Alle na ma jecla khayaamo badane dambi badan.

يَسْتَخْفُونَ مِنَ ٱلنَّاسِ وَلَا يَسْتَخْفُونَ مِنَ ٱللَّهِ وَهُوَ مَعَهُمْ إِذْ يُبَيِّتُونَ مَا لَا يَرْضَىٰ مِنَ ٱلْقَوْلِ ۚ وَكَانَ ٱللَّهُ بِمَا يَعْمَلُونَ مُحِيطًا ﴿١٠٨﴾

108. Waxay iska qarin dadka iskamana qariyaan Alle isagoo la jooga markay maamuli wuxuusan raalli ka ahayn oo hadal ah, Alle na waxay camal fali wuu koobay.

هَٰٓأَنتُمْ هَٰٓؤُلَآءِ جَٰدَلْتُمْ عَنْهُمْ فِى ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا فَمَن يُجَٰدِلُ ٱللَّهَ عَنْهُمْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ أَم مَّن يَكُونُ عَلَيْهِمْ وَكِيلًا ﴿١٠٩﴾

109. Idinku kuwaasow waad ka dooddeen xaggooda nolosha adduunyo yaase ka doodi xaggooda maalinta qiyaame ama u noqon wakiil.

Aayadahanna waxay caddayn in Alle la xuso salaadda dabadeed iyo si kastoo la yahay, markaan dagaal la jooginna salaadda la dhamaystiro, tan kale waa inaan jahaadka laga cabsanin illeen haddaynu xanuunsan gaaladuba way xanuunsane waxaynu Alle na ka rajayn janno iyo liibaan ayna iyagu rajaynayn. Quraankana waxaa loo soo dajiyey in laysku xukumo, xumaantana waa inaan garab la siin, Alle na dambi dhaaf la warsado oon lagana doodin xagga kuwa khaa'imiinta ah, ee dadka iska qarin, Alle na aan iska ilaalinayn markay wax qarsan, cid qiyaame wax u tarina ma jirto. **[An-Nisaa': 103-109].**

وَمَن يَعْمَلْ سُوٓءًا أَوْ يَظْلِمْ نَفْسَهُۥ ثُمَّ يَسْتَغْفِرِ ٱللَّهَ يَجِدِ ٱللَّهَ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿١١٠﴾

110. Ruuxii fala xumaan ama dulmiya naftiisa (dambaaba) markaas dambi dhaaf warsada Alle wuxuu ka heli (ogaanna) isagoo dambi dhaafa ah naxariistana.

وَمَن يَكْسِبْ إِثْمًا فَإِنَّمَا يَكْسِبُهُۥ عَلَىٰ نَفْسِهِۦ ۚ وَكَانَ ٱللَّهُ عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿١١١﴾

111. Ruuxii kasbada danbi wuxuu uun u kasbaday naftiisa (dhibkeeda) Alle na waa oge falsan.

وَمَن يَكۡسِبۡ خَطِيٓـَٔةً أَوۡ إِثۡمٗا ثُمَّ يَرۡمِ بِهِۦ بَرِيٓـٔٗا فَقَدِ ٱحۡتَمَلَ بُهۡتَٰنٗا وَإِثۡمٗا مُّبِينٗا ﴿١١٢﴾

112. Ruuxii kasbada gaf ama dambi markaas ku gana dambiga (ku sheega) mid bari ah wuxuu xambaartay been abuurasho iyo dambi cad.

وَلَوۡلَا فَضۡلُ ٱللَّهِ عَلَيۡكَ وَرَحۡمَتُهُۥ لَهَمَّت طَّآئِفَةٞ مِّنۡهُمۡ أَن يُضِلُّوكَ وَمَا يُضِلُّونَ إِلَّآ أَنفُسَهُمۡۖ وَمَا يَضُرُّونَكَ مِن شَيۡءٖۚ وَأَنزَلَ ٱللَّهُ عَلَيۡكَ ٱلۡكِتَٰبَ وَٱلۡحِكۡمَةَ وَعَلَّمَكَ مَا لَمۡ تَكُن تَعۡلَمُۚ وَكَانَ فَضۡلُ ٱللَّهِ عَلَيۡكَ عَظِيمٗا ﴿١١٣﴾

113. Hadduusan jirin fadliga Alle ee korkaaga iyo naxariistiisa waxay hammin lahayd koox (dooni lahayd) oo ka mid ah inay ku dhumiyaan mana dhumiyaan naftooda mooyee mana kaa dhibaan waxba, wuxuuna kugu soo dajiyey Alle kitaabka iyo xigmadda wuxuuna ku baray waxaadan aqoon, fadliga Alle na korkaaga waa ku wayn yahay.

۞ لَّا خَيۡرَ فِي كَثِيرٖ مِّن نَّجۡوَىٰهُمۡ إِلَّا مَنۡ أَمَرَ بِصَدَقَةٍ أَوۡ مَعۡرُوفٍ أَوۡ إِصۡلَٰحِۭ بَيۡنَ ٱلنَّاسِۚ وَمَن يَفۡعَلۡ ذَٰلِكَ ٱبۡتِغَآءَ مَرۡضَاتِ ٱللَّهِ فَسَوۡفَ نُؤۡتِيهِ أَجۡرًا عَظِيمٗا ﴿١١٤﴾

114. Khayr ma leh wax badan oo faqooda ah, oon ahayn mid fara sadaqo ama wanaag ama hagaajin dadka dhexdooda, ruuxii fala saas doonid raalli ahaanshaha Alle waxaanu siin ajir wayn.

وَمَن يُشَاقِقِ ٱلرَّسُولَ مِنۢ بَعۡدِ مَا تَبَيَّنَ لَهُ ٱلۡهُدَىٰ وَيَتَّبِعۡ غَيۡرَ سَبِيلِ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ نُوَلِّهِۦ مَا تَوَلَّىٰ وَنُصۡلِهِۦ جَهَنَّمَۖ وَسَآءَتۡ مَصِيرًا ﴿١١٥﴾

115. Ruuxii khilaafa Rasuulka ka dib intuu u cadaaday hanuunku oo raaca jidka mu'mininta midaan ahayn waxaan uga wali yeeleynaa wuxuu yeeshay waxaana galinaynaa jahannamo iyadaana u xun meel loo ahaado.

Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: wuxuu uga warramay Alle addoomadiisa cafigiisa, dulqaadkiisa, deeqdiisa, naxariistiisa waasaca ah iyo dambi dhaafkiisa, ruuxii dambaaba ha yaraado ama ha waynaado oo dambi dhaaf warsada Alle, wuxuu

heli Alle oo dambi dhaafi oo naxariisan, haba ka waynaato samaawaadka iyo dhulka iyo buuraha. Tan kale gaaladu waxay uun baadiyeyn naftooda. Alle na wuxuu siiyey Nabiga kitaab iyo xigmo wuxuuna baray wuxuuna aqoonnin Alle ayaana fadli wayn siiyay. Faqaan wanaag ahaynna ma fiicna, ciddii ka leexata jidka Nabiga iyo mu'miniintana wuxuu galin naar daran. **[An-Nisaa': 110-115].**

إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَغۡفِرُ أَن يُشۡرَكَ بِهِۦ وَيَغۡفِرُ مَا دُونَ ذَٰلِكَ لِمَن يَشَآءُۚ وَمَن يُشۡرِكۡ بِٱللَّهِ فَقَدۡ ضَلَّ ضَلَٰلَۢا بَعِيدًا ﴿١١٦﴾

116. Alle ma dhaafo in lala wadaajiyo (cid kale cibaadada) wuuse ka dhaafaa wixii waxaas ka soo hadhay cidduu doono, ruuxii la wadaajiya Alle wuxuu dhumay dhumid wayn.

إِن يَدۡعُونَ مِن دُونِهِۦٓ إِلَّآ إِنَٰثٗا وَإِن يَدۡعُونَ إِلَّا شَيۡطَٰنٗا مَّرِيدًا ﴿١١٧﴾

117. Ma caabudayaan Alle ka sokow waxaan dhadig ahayn, mana caabudayaan waxaan shaydaan madax adag ahayn.

لَّعَنَهُ ٱللَّهُۘ وَقَالَ لَأَتَّخِذَنَّ مِنۡ عِبَادِكَ نَصِيبٗا مَّفۡرُوضٗا ﴿١١٨﴾

118. Alle waa uu lacnaday shaydaan, wuxuu yidhi (shaydaanki): waxaan ku yeelan addomadaada qayb sugan.

وَلَأُضِلَّنَّهُمۡ وَلَأُمَنِّيَنَّهُمۡ وَلَأٓمُرَنَّهُمۡ فَلَيُبَتِّكُنَّ ءَاذَانَ ٱلۡأَنۡعَٰمِ وَلَأٓمُرَنَّهُمۡ فَلَيُغَيِّرُنَّ خَلۡقَ ٱللَّهِۚ وَمَن يَتَّخِذِ ٱلشَّيۡطَٰنَ وَلِيّٗا مِّن دُونِ ٱللَّهِ فَقَدۡ خَسِرَ خُسۡرَانٗا مُّبِينٗا ﴿١١٩﴾

119. Waan baadiyeyn, waan yididiilo (xun) galin waana fari (xumaanta) waxayna jeex jeexi dhagaha xoolaha, waana fari (xumaanta) waxayna doorin abuurka Alle, ruuxii ka yeesha shaydaan wali Alle ka sokow dhab ahaan buu u khasaaray khasaare cad.

يَعِدُهُمۡ وَيُمَنِّيهِمۡۖ وَمَا يَعِدُهُمُ ٱلشَّيۡطَٰنُ إِلَّا غُرُورًا ﴿١٢٠﴾

120. Wuu u yaboohi oo yididiila galin mana yabooho shaydaan waxaan dhagar iyo khatalid ahayn.

أُوْلَٰٓئِكَ مَأۡوَىٰهُمۡ جَهَنَّمُ وَلَا يَجِدُونَ عَنۡهَا مَحِيصٗا ﴿١٢١﴾

121. Kuwaasna hooygoodu waa jahanamo kamana helaan xaggeeda iilasho (iyo fakasho).

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ سَنُدۡخِلُهُمۡ جَنَّٰتٖ تَجۡرِي مِن تَحۡتِهَا ٱلۡأَنۡهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدٗاۖ وَعۡدَ ٱللَّهِ حَقّٗاۚ وَمَنۡ أَصۡدَقُ مِنَ ٱللَّهِ قِيلٗا ١٢٢

122. Kuwa rumeeyey xaqa oo fala camal fiican waxaannu galin jannooyin oy socoto dhexdeeda wabiyaal oyna ku waari dhexdeeda waligeed, waana yabooha Alle oo sugan, yaa ka run badan Alle hadal (cidna).

Alle wuu ka dhaafaa waxaan gaalnimo ahayn cidduu doono, gaalana waxay caabudaan sanamyo iyo shaydaan Alle lacnaday oo ballan qaaday inuu qayb ku yeeshaa dadka, kuna dhaartay inuu dhumiyaa oo xumaan faraa intay ka dooriyaan abuurka Alle, ciddii shaydaan wali ka yeelatana wuxuu khasaaray khasaare wayn. Wuxuu yaboohina waa dhagar iyo naar, ciddiise xaqa raacda oo camal fiican fasha wuxuu gali janno uu ku waari, Alle na waa runle, Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: hadal waxaa u run badan hadalka Alle, hanuunna waxaa u fiican hanuunka Muxamed, waxaana u xun umuuraha waxaa la soo darriyey waana bidco baadi ah. **[An-Nisaa': 116-122].**

لَّيۡسَ بِأَمَانِيِّكُمۡ وَلَآ أَمَانِيِّ أَهۡلِ ٱلۡكِتَٰبِۗ مَن يَعۡمَلۡ سُوٓءٗا يُجۡزَ بِهِۦ وَلَا يَجِدۡ لَهُۥ مِن دُونِ ٱللَّهِ وَلِيّٗا وَلَا نَصِيرٗا ١٢٣

123. Ma aha (xaalku) yididiiladiinna iyo yididiilada ehelu kitaabka midna, ciddii fasha xumaan waa laga abaal marin mana helayo Alle ka sokow wali iyo gargaare (midna).

وَمَن يَعۡمَلۡ مِنَ ٱلصَّٰلِحَٰتِ مِن ذَكَرٍ أَوۡ أُنثَىٰ وَهُوَ مُؤۡمِنٞ فَأُوْلَٰٓئِكَ يَدۡخُلُونَ ٱلۡجَنَّةَ وَلَا يُظۡلَمُونَ نَقِيرٗا ١٢٤

124. Ruuxii fala wanaag lab ah ama dhadig isagoo rumeysan (xaqa) kuwaasu waxay gali jannada lagamana dulmiyo duleel (laftimireed).

وَمَنۡ أَحۡسَنُ دِينٗا مِّمَّنۡ أَسۡلَمَ وَجۡهَهُۥ لِلَّهِ وَهُوَ مُحۡسِنٞ وَٱتَّبَعَ مِلَّةَ إِبۡرَٰهِيمَ حَنِيفٗاۗ وَٱتَّخَذَ ٱللَّهُ إِبۡرَٰهِيمَ خَلِيلٗا ١٢٥

125. Yaa ka diin fiican ruux u jeediyey wajigiisa Alle isagoo sama fali oo raaca diinta (Nabi) Ibraahim, wuxuuna ka yeeshay Alle Ibrahiim Khaliil (mid u gaar ah, oo jacaylka kii ugu sarreeyay uu jecel yahay).

وَلِلَّهِ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلۡأَرۡضِۚ وَكَانَ ٱللَّهُ بِكُلِّ شَيۡءٖ مُّحِيطَۢا ١٢٦

126. Alle waxaa u sugnaaday waxa ku sugan samooyinka iyo dhulka, Allana waa wax walba koobe.

وَيَسۡتَفۡتُونَكَ فِي ٱلنِّسَآءِۖ قُلِ ٱللَّهُ يُفۡتِيكُمۡ فِيهِنَّ وَمَا يُتۡلَىٰ عَلَيۡكُمۡ فِي ٱلۡكِتَٰبِ فِي يَتَٰمَى ٱلنِّسَآءِ ٱلَّٰتِي لَا تُؤۡتُونَهُنَّ مَا كُتِبَ لَهُنَّ وَتَرۡغَبُونَ أَن تَنكِحُوهُنَّ وَٱلۡمُسۡتَضۡعَفِينَ مِنَ ٱلۡوِلۡدَٰنِ وَأَن تَقُومُواْ لِلۡيَتَٰمَىٰ بِٱلۡقِسۡطِۚ وَمَا تَفۡعَلُواْ مِنۡ خَيۡرٖ فَإِنَّ ٱللَّهَ كَانَ بِهِۦ عَلِيمٗا ١٢٧

127. Waxay ku warsan haweenka, waxaad dhahdaa Alle ayaa idiin fidyoon (sheegi) xaalkooda iyo waxa lagu akhriyi korkiinna kitaabka haweenka agoonta ah ee ah kuwaydaan siinayn waxa loo qaddaray oo doonaysaan inaad guursataan iyo kuwa tabarta yar ee carruurta ah, iyo inaad u maamushaan agoonta cadaalad, waxaad fashaan oo kheyr ahna Alle waa og yahay.

Waxaa jirtay inay isu faaneen muslimiin iyo gaalo, markaas Alle soo dajiyey aayaddan mana aha cidna waxay iyadu doonto ee xumaan iyo wanaagba waa layska abaal marin, rag iyo haweenna waxba lagama nusqaamiyo wanaaggay falaan. Wax ka fiicanna ma jiro cid raacday waddadii Nabi Ibraahim oo ah diinta islaamka. Aayadda dambana waxay ka warrami sida loola dhaqmi haweenka agoonta ah ee dhaqaalaynaysaan iyo kuwa tabarta yar ee carruurta ah iyo in agoonta caddaalad lagu dhaqo, illeen Alle ayaa wax walba oge. Markay soo dagtay aayadda hore yey naxeen asaxaabtii oy dheheen waxba uma reebin ummadan, markaasuu Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) yidhi: way soo dagtaye bishaaraysta oo dhex dhexaysta. **[An-Nisaa': 123-127].**

وَإِنِ ٱمۡرَأَةٌ خَافَتۡ مِنۢ بَعۡلِهَا نُشُوزًا أَوۡ إِعۡرَاضٗا فَلَا جُنَاحَ عَلَيۡهِمَآ أَن يُصۡلِحَا بَيۡنَهُمَا صُلۡحٗاۚ وَٱلصُّلۡحُ خَيۡرٞۗ وَأُحۡضِرَتِ ٱلۡأَنفُسُ ٱلشُّحَّۚ وَإِن تُحۡسِنُواْ وَتَتَّقُواْ فَإِنَّ ٱللَّهَ كَانَ بِمَا تَعۡمَلُونَ خَبِيرٗا ١٢٨

128. Hadday haweeney ka cabsato ninkeeda xaggiisa fogaansho ama jeedsasho dhib ma saarna korkooda hadday heshiiyaan heshiis, heshiiskaana khayr ah, waxaana lagu soo kulmiyey nafta bakhaylnimo, haddaad se wanaag fashaan ood dhawrsataan Alle waxaad camal falaysaan waa og yahay.

وَلَن تَسۡتَطِيعُوٓاْ أَن تَعۡدِلُواْ بَيۡنَ ٱلنِّسَآءِ وَلَوۡ حَرَصۡتُمۡۖ فَلَا تَمِيلُواْ كُلَّ ٱلۡمَيۡلِ فَتَذَرُوهَا كَٱلۡمُعَلَّقَةِۚ وَإِن تُصۡلِحُواْ وَتَتَّقُواْ فَإِنَّ ٱللَّهَ كَانَ غَفُورٗا رَّحِيمٗا ١٢٩

129. Ma kartaan inaad sintaan haweenkiinna dhexdooda aadba dadaasheene ee ha ka iilannina iilasho dhan, oo ka tagtaan sida mid xidhan (dayacan), haddaad wanaajisaan ood dhawrsataan Alle waa dambi dhaafe naxariista.

وَإِن يَتَفَرَّقَا يُغۡنِ ٱللَّهُ كُلّٗا مِّن سَعَتِهِۦۚ وَكَانَ ٱللَّهُ وَٰسِعًا حَكِيمٗا ١٣٠

130. Hadday kala tagaan wuu kaafiyaa Alle mid kasta waasacnimadiisa, Alle na waa waasac (fadligiisu) waana falsame.

وَلِلَّهِ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلۡأَرۡضِۗ وَلَقَدۡ وَصَّيۡنَا ٱلَّذِينَ أُوتُواْ ٱلۡكِتَٰبَ مِن قَبۡلِكُمۡ وَإِيَّاكُمۡ أَنِ ٱتَّقُواْ ٱللَّهَۚ وَإِن تَكۡفُرُواْ فَإِنَّ لِلَّهِ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلۡأَرۡضِۚ وَكَانَ ٱللَّهُ غَنِيّٗا حَمِيدٗا ١٣١

131. Alle ayaa iska leh waxa samaawaadka ku sugan iyo dhulka, waxaana u dardaarannay kuwii la siiyey kitaabka ee idinka horreeyey iyo idinkaba ka dhawrsada Alle, haddaadse gaaloowdaan Alle waxaa u sugnaaday waxa ku sugan samaawaadka iyo dhulka. Alle na waa hodan ammaanan.

وَلِلَّهِ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلۡأَرۡضِۚ وَكَفَىٰ بِٱللَّهِ وَكِيلًا ١٣٢

132. Alle ayaa iska leh waxa ku sugan samaawaadka iyo dhulka waana ku filan yahay Alle wakiil.

إِن يَشَأۡ يُذۡهِبۡكُمۡ أَيُّهَا ٱلنَّاسُ وَيَأۡتِ بِـَٔاخَرِينَۚ وَكَانَ ٱللَّهُ عَلَىٰ ذَٰلِكَ قَدِيرٗا ١٣٣

133. Hadduu doono wuu idin tagsiin (dhamayn) dadow lana imaan kuwo kale waana karaa Alle taas.

مَّن كَانَ يُرِيدُ ثَوَابَ ٱلدُّنۡيَا فَعِندَ ٱللَّهِ ثَوَابُ ٱلدُّنۡيَا وَٱلۡأٓخِرَةِۚ وَكَانَ ٱللَّهُ سَمِيعَۢا بَصِيرٗا ١٣٤

134. Ruuxii dooni abaal adduunyo Alle agtiisa yuu jiraa abaalka adduunyo iyo aakhiraba Alle na waa maqle arka.

Hadday haweenaydu ka kasto ninkeeda fogaansho ama jeedsasho waa inay heshiiyaan xumaantana layska jiraa, tan kale in caddaaladda lagu dadaalo ciddii laba haweena qabta, haddii lakala tagana Allaa deeqi cid walba, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: ciddii laba haweena qaba oo u iisha middood wuxuu yimaadaa maalinta qiyaame isagoo dhinac leexsan. Tan kale Alle ayaa xukunka iska leh, wuxuuna faray dadka dhammaan Alla ka yaabid, illeen hadduu doono wuu dhammayn karaa dadkee, aakhiro iyo adduunba Alle ayaa iska leh, waana in si quruxsan Alle looga doono. **[An-Nisaa': 128-134].**

135. Kuwa (xaqa) rumeeyow noqda kuwo u istaaga caddaalad oo ah marag Alle, naftiinnaba ha ahaato ama waalidkiin ama qaraabo, hadday hodan yihiin ama faqiir Alle ayaa u mudnaansho badan ee ha ka raacina hawada inaad caddaalo fashaan, haddaadse iilataan ama jeedsataan Alle waxaad camal falaysaan waa og yahay.

* يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ كُونُواْ قَوَّٰمِينَ بِٱلْقِسْطِ شُهَدَآءَ لِلَّهِ وَلَوْ عَلَىٰٓ أَنفُسِكُمْ أَوِ ٱلْوَٰلِدَيْنِ وَٱلْأَقْرَبِينَ ۚ إِن يَكُنْ غَنِيًّا أَوْ فَقِيرًا فَٱللَّهُ أَوْلَىٰ بِهِمَا ۖ فَلَا تَتَّبِعُواْ ٱلْهَوَىٰٓ أَن تَعْدِلُواْ ۚ وَإِن تَلْوُۥٓاْ أَوْ تُعْرِضُواْ فَإِنَّ ٱللَّهَ كَانَ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرًا ﴿١٣٥﴾

136. Kuwa (xaqa) rumeeyow rumeeya Alle (si dhabah) iyo Rasuulkiisa iyo kitaabka uu ku dejiyey rasuulkiisa iyo kitaabkuu u dejiyey horay, ruuxiise ka gaalooba Alle, malaa'igtiisa, kutubtiisa, rasuulladiisa iyo maalinta dambe (qiyaamada) wuu dhumay dhumid fog.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ ءَامِنُواْ بِٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ وَٱلْكِتَـٰبِ ٱلَّذِى نَزَّلَ عَلَىٰ رَسُولِهِۦ وَٱلْكِتَـٰبِ ٱلَّذِىٓ أَنزَلَ مِن قَبْلُ ۚ وَمَن يَكْفُرْ بِٱللَّهِ وَمَلَـٰٓئِكَتِهِۦ وَكُتُبِهِۦ وَرُسُلِهِۦ وَٱلْيَوْمِ ٱلْـَٔاخِرِ فَقَدْ ضَلَّ ضَلَـٰلًۢا بَعِيدًا ﴿١٣٦﴾

137. Kuwa rumeeyey ee gaaloobay ee hadana rumeeyey ee gaaloobay markaas sii badsaday gaalnimo ma aha Alle mid u dhaafi iyaga, kumana hanuuniyo jidka (toosan).

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ ثُمَّ كَفَرُواْ ثُمَّ ءَامَنُواْ ثُمَّ كَفَرُواْ ثُمَّ ٱزْدَادُواْ كُفْرًا لَّمْ يَكُنِ ٱللَّهُ لِيَغْفِرَ لَهُمْ وَلَا لِيَهْدِيَهُمْ سَبِيلًۢا ﴿١٣٧﴾

بَشِّرِ ٱلْمُنَٰفِقِينَ بِأَنَّ لَهُمْ عَذَابًا أَلِيمًا ﴿١٣٨﴾

138. Ugu bishaaree munaafiqiinta inay mudan cadaab daran.

ٱلَّذِينَ يَتَّخِذُونَ ٱلْكَٰفِرِينَ أَوْلِيَآءَ مِن دُونِ ٱلْمُؤْمِنِينَ ۚ أَيَبْتَغُونَ عِندَهُمُ ٱلْعِزَّةَ فَإِنَّ ٱلْعِزَّةَ لِلَّهِ جَمِيعًا ﴿١٣٩﴾

139. Waana kuwa ka yeesha gaalada sokeeye mu'miniinta ka sokow, ma waxay ka dooni agtooda sharaf, sharafna Alle ayaa iska leh dhammaanteed.

وَقَدْ نَزَّلَ عَلَيْكُمْ فِى ٱلْكِتَٰبِ أَنْ إِذَا سَمِعْتُمْ ءَايَٰتِ ٱللَّهِ يُكْفَرُ بِهَا وَيُسْتَهْزَأُ بِهَا فَلَا تَقْعُدُوا۟ مَعَهُمْ حَتَّىٰ يَخُوضُوا۟ فِى حَدِيثٍ غَيْرِهِۦٓ ۚ إِنَّكُمْ إِذًا مِّثْلُهُمْ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ جَامِعُ ٱلْمُنَٰفِقِينَ وَٱلْكَٰفِرِينَ فِى جَهَنَّمَ جَمِيعًا ﴿١٤٠﴾

140. Wuxuuna ku soo dejiyey korkiinna kitaabka dhexdiisa haddaad maqashaan aayaadka Alle oo laga gaaloobi ama lagu jees jeesi ha fadhiisanina agtooda intay ka dhumbadaan hadal kale, haddii kale waxaad noqonaysaan iyaga oo kale, Alle na wuxuu ku kulmin munaafiqiinta iyo gaalada jahannamo dhammaan.

Waa in caddaaladda lagu dadaalaa naftaada, waalidkaa iyo qaraabadaadaba ha ahaatee, illeen Alle ayaa ku mudnaan badane, waana inaan hawada la raacin waana in si dhab ah loo rumeeyo Alle, Rasuulkiisa, kitaabka quraanka ah iyo kutubtii horaba, ciddii ka gaalowda Alle, malaa'igta, rasuullada iyo maalinta dambe waa cid dhuntay. Kuwase marna gaalooba marna wax rumeyn waa kuwo dhumay, munaafiqiintana waxay gali naar daran, waana kuwa gaalada sokeeye ka dhigan, kuna jees jeesa quraanka iyo xaqa, abaalkooduna waa naar. **[An-Nisaa': 135-140].**

ٱلَّذِينَ يَتَرَبَّصُونَ بِكُمْ فَإِن كَانَ لَكُمْ فَتْحٌ مِّنَ ٱللَّهِ قَالُوٓا۟ أَلَمْ نَكُن مَّعَكُمْ وَإِن كَانَ لِلْكَٰفِرِينَ نَصِيبٌ قَالُوٓا۟ أَلَمْ نَسْتَحْوِذْ عَلَيْكُمْ وَنَمْنَعْكُم مِّنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ۚ فَٱللَّهُ يَحْكُمُ بَيْنَكُمْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ ۗ وَلَن يَجْعَلَ ٱللَّهُ لِلْكَٰفِرِينَ عَلَى ٱلْمُؤْمِنِينَ سَبِيلًا ﴿١٤١﴾

141. Oo ah kuwa idin la suga (dhibaato) hadduu gargaar xagga Alle idiinka ahaado waxay dhihi miyaanaan idinla jirin, hadduu gaalada u sugnaado nasiibna waxay dhahaan miyaanaan idin adkeynin oonnaan idinka reebin mu'miniinta, Allaa xukumi dhexdooda maalinta qiyaame,

mana ugu yeelayo Alle gaalada mu'miniita korkooda waddo.

إِنَّ ٱلْمُنَٰفِقِينَ يُخَٰدِعُونَ ٱللَّهَ وَهُوَ خَٰدِعُهُمْ وَإِذَا قَامُوٓاْ إِلَى ٱلصَّلَوٰةِ قَامُواْ كُسَالَىٰ يُرَآءُونَ ٱلنَّاسَ وَلَا يَذْكُرُونَ ٱللَّهَ إِلَّا قَلِيلًا ﴿١٤٢﴾

142. Munaafiqiintu waxay dhagri Alle (isku dayi) isna wuu dhagri, markay u istaagaan salaaddana way istaagaan iyagoo wahsan, oo is tusi dadka mana xusaan Alle wax yar mooyee.

مُّذَبْذَبِينَ بَيْنَ ذَٰلِكَ لَآ إِلَىٰ هَٰٓؤُلَآءِ وَلَآ إِلَىٰ هَٰٓؤُلَآءِ ۚ وَمَن يُضْلِلِ ٱللَّهُ فَلَن تَجِدَ لَهُۥ سَبِيلًا ﴿١٤٣﴾

143. Waxayna ku noqnoqon (wareeri) arrintaas dhexdeeda kuwaasina lama jiraan kuwaana lama jiraan, cidduu dhumiyey Alle uma heshid waddo (cid hanuunin).

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تَتَّخِذُواْ ٱلْكَٰفِرِينَ أَوْلِيَآءَ مِن دُونِ ٱلْمُؤْمِنِينَ ۚ أَتُرِيدُونَ أَن تَجْعَلُواْ لِلَّهِ عَلَيْكُمْ سُلْطَٰنًا مُّبِينًا ﴿١٤٤﴾

144. Kuwa (xaqa) rumeeyow ha ka yeelannina gaalada sokeeye mu'miniinta ka sokow, ma waxaad doonaysaan inaad isugu yeeshaan Alle korkiinna xujo cad (inuu idin ciqaabo).

إِنَّ ٱلْمُنَٰفِقِينَ فِى ٱلدَّرْكِ ٱلْأَسْفَلِ مِنَ ٱلنَّارِ وَلَن تَجِدَ لَهُمْ نَصِيرًا ﴿١٤٥﴾

145. Munaafiqiintu waxay ku sugnaan dabaqa hoose ee naarta umana heshid gargaare.

إِلَّا ٱلَّذِينَ تَابُواْ وَأَصْلَحُواْ وَٱعْتَصَمُواْ بِٱللَّهِ وَأَخْلَصُواْ دِينَهُمْ لِلَّهِ فَأُوْلَٰٓئِكَ مَعَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ۖ وَسَوْفَ يُؤْتِ ٱللَّهُ ٱلْمُؤْمِنِينَ أَجْرًا عَظِيمًا ﴿١٤٦﴾

146. Kuwa mooyee toobadkeena ee wanaajiya camalka, oo isku dhawra Alle, oo u kali yeela diintooda (cibaadadooda) Alle kuwaasi waxay la jiri mu'miniinta, wuuna siin doonaan Alle mu'miniinta ajir wayn.

مَّا يَفْعَلُ ٱللَّهُ بِعَذَابِكُمْ إِن شَكَرْتُمْ وَءَامَنتُمْ ۚ وَكَانَ ٱللَّهُ شَاكِرًا عَلِيمًا ﴿١٤٧﴾

147. Muxuu ku fali Alle cadaabkiinna haddaad mahdisaan ood rumeysaan,

Alle na waa mahdiye waana oge.

Munaafiqiintu waa kuwa muslimiinta la suga balaayo, hadday guul helaanna yidhaahda waan idin la jirnay, hadday gaaladu wax gaadhaanna dhaha annagaa idin guulaynay, kuwaase Alle ayaa kala xukumi iyaga iyo mu'miniinta, Alle na uguma yeelo jid iyo xujo mu'miniinta korkooda, munaafiqiintu waa kuwa salaaddu ku culus tahay dadkana is tus tusiya, oon meella haysan. Tan kale waa inaan gaalo sokeeye laga dhigan mu'miniinta intii la gudbo si aan ciqaab Alle u imaan, munaafiq abaalkiisna waa dabaqa hoose ee naarta, ciddiise toobad keenta oo xaqa raacda Alle na dhab ahaan u caabuda waxba Alle cadaabkeeda iyo ciqaabteeda ku fali maayo, wuuna ku mahdin. Waxaana la weriyay (camalka Alle u kali yeel wax yarbaa kugu fillaane). Xaakim. Waxayna ku tusin naxariista Alle iyo inuusan rabin ciqaabta addoomadiisa hadday toosnaadaan. **[An-Nisaa': 141-147].**

لَّا يُحِبُّ ٱللَّهُ ٱلْجَهْرَ بِٱلسُّوٓءِ مِنَ ٱلْقَوْلِ إِلَّا مَن ظُلِمَ ۚ وَكَانَ ٱللَّهُ سَمِيعًا عَلِيمًا ﴿١٤٨﴾

إِن تُبْدُوا۟ خَيْرًا أَوْ تُخْفُوهُ أَوْ تَعْفُوا۟ عَن سُوٓءٍ فَإِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَفُوًّا قَدِيرًا ﴿١٤٩﴾

إِنَّ ٱلَّذِينَ يَكْفُرُونَ بِٱللَّهِ وَرُسُلِهِۦ وَيُرِيدُونَ أَن يُفَرِّقُوا۟ بَيْنَ ٱللَّهِ وَرُسُلِهِۦ وَيَقُولُونَ نُؤْمِنُ بِبَعْضٍ وَنَكْفُرُ بِبَعْضٍ وَيُرِيدُونَ أَن يَتَّخِذُوا۟ بَيْنَ ذَٰلِكَ سَبِيلًا ﴿١٥٠﴾

أُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْكَٰفِرُونَ حَقًّا ۚ وَأَعْتَدْنَا لِلْكَٰفِرِينَ عَذَابًا مُّهِينًا ﴿١٥١﴾

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ بِٱللَّهِ وَرُسُلِهِۦ وَلَمْ يُفَرِّقُوا۟ بَيْنَ أَحَدٍ مِّنْهُمْ أُو۟لَٰٓئِكَ سَوْفَ يُؤْتِيهِمْ أُجُورَهُمْ ۚ وَكَانَ ٱللَّهُ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿١٥٢﴾

148. Ma jecla Alle in lala qayliyo xumaan oo hadal ah ruux la dulmiyey mooyee, Alle na waa maqle og.

149. Haddaad muujisaan khayr ama qarisaan ama cafidaan xumaan Alle na waa dhaafe kara.

150. Kuwa ka gaalooba Alle iyo rasuulkiisa oo dooni inay kala geeyaan Alle iyo rasuulladiisa oo odhan waxaannu rumayn qaar waana diidi qaar oo dooni inay ka yeeshaan arrintaa dhexdeeda waddo.

151. Kuwaasi iyaga umbaa gaalo dhab ah, waxaana u darbannay gaalada cadaab wax dulleeya.

152. Kuwa rumeeyay Alle iyo rasuulladiisa oon kala bixinnin cid ka mid ah kuwaas wuu siin doonaa (Alle) ajirkooda, Alle na waa dhaafe naxariista.

153. Waxay ku warsan ehelu kitaabku inaad kaga soo dejiso kitaab xagga samada, dhab ahaan yey u warsadeen (Nabi) Muuse wax ka wayn kaas waxayna dheheen noo tusi Alle si cad waxaana qabatay qaylo (daran) dulmigooda dartiis, waxayna yeesheen dibi intay u timid xujooyin, waana ka cafinnay arrintaas, waxaana siinnay Nabi Muuse xujo cad.

يَسْـَٔلُكَ أَهْلُ ٱلْكِتَٰبِ أَن تُنَزِّلَ عَلَيْهِمْ كِتَٰبًا مِّنَ ٱلسَّمَآءِ ۚ فَقَدْ سَأَلُوا۟ مُوسَىٰٓ أَكْبَرَ مِن ذَٰلِكَ فَقَالُوٓا۟ أَرِنَا ٱللَّهَ جَهْرَةً فَأَخَذَتْهُمُ ٱلصَّٰعِقَةُ بِظُلْمِهِمْ ۚ ثُمَّ ٱتَّخَذُوا۟ ٱلْعِجْلَ مِنۢ بَعْدِ مَا جَآءَتْهُمُ ٱلْبَيِّنَٰتُ فَعَفَوْنَا عَن ذَٰلِكَ ۚ وَءَاتَيْنَا مُوسَىٰ سُلْطَٰنًا مُّبِينًا ﴿١٥٣﴾

Ma habboona in xumaan iyo hadal dhib ah lala qayliyo, ciddiise la dulmiyo waxaa u bannaan inuu aarsado. Ibnu cabaas wuxuu yidhi: ma jecla Alle in ruuxna ruux habaaro haddaan la dulmiyin. Alle na wax walba waa og yahay, ciddii kala saarta Alle iyo rasuulladiisa kuwaasu waa gaalo dhab ah gaalana waxaa loo darbay cadaab daran, mu'miniintuse waxay mudan janno illeen ma kala saarin xaqee. Tan kale ma habboona sidii yuhuuddii Nabiga si madax adayg ah wax u warsan jiray illeen caaday u tahaye waxayna warsadeen Nabi Muuse wax ka wayn, waana in laga fogaado jidkooda. **[An-Nisaa': 148-153].**

154. Waxaan kor yeellay (buurta) Dhuur ballankoodii dartiis waxaanna ku nidhi ka gala irridda idinkoo sujuudsan, waxaana ku nidhi ha ku xadgudbina sabtida waxaana ka qaadnay ballan adag.

وَرَفَعْنَا فَوْقَهُمُ ٱلطُّورَ بِمِيثَٰقِهِمْ وَقُلْنَا لَهُمُ ٱدْخُلُوا۟ ٱلْبَابَ سُجَّدًا وَقُلْنَا لَهُمْ لَا تَعْدُوا۟ فِى ٱلسَّبْتِ وَأَخَذْنَا مِنْهُم مِّيثَٰقًا غَلِيظًا ﴿١٥٤﴾

155. (Waan lacnadnay) burintooda ballankooda iyo ka gaalowgooda aayaadka Alle iyo u dilidda Nabiyada xaqdarro iyo hadalkooda quluubtannadu way daboolan tahay, saas ma aha ee waxaa daabacay (daboolay) Alle gaalnimadooda darteed mana rumeeyaan wax yar mooyee.

فَبِمَا نَقْضِهِم مِّيثَٰقَهُمْ وَكُفْرِهِم بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ وَقَتْلِهِمُ ٱلْأَنۢبِيَآءَ بِغَيْرِ حَقٍّ وَقَوْلِهِمْ قُلُوبُنَا غُلْفٌ ۚ بَلْ طَبَعَ ٱللَّهُ عَلَيْهَا بِكُفْرِهِمْ فَلَا يُؤْمِنُونَ إِلَّا قَلِيلًا ﴿١٥٥﴾

وَبِكُفْرِهِمْ وَقَوْلِهِمْ عَلَىٰ مَرْيَمَ بُهْتَٰنًا عَظِيمًا ﴿١٥٦﴾

156. Iyo gaalnimadooda darteed iyo hadalkooda Maryama oy ku been abuurteen si wayn.

وَقَوْلِهِمْ إِنَّا قَتَلْنَا ٱلْمَسِيحَ عِيسَى ٱبْنَ مَرْيَمَ رَسُولَ ٱللَّهِ وَمَا قَتَلُوهُ وَمَا صَلَبُوهُ وَلَٰكِن شُبِّهَ لَهُمْ ۚ وَإِنَّ ٱلَّذِينَ ٱخْتَلَفُوا۟ فِيهِ لَفِى شَكٍّ مِّنْهُ ۚ مَا لَهُم بِهِۦ مِنْ عِلْمٍ إِلَّا ٱتِّبَاعَ ٱلظَّنِّ ۚ وَمَا قَتَلُوهُ يَقِينًۢا ﴿١٥٧﴾

157. Iyo hadalkoodii ahaa annagaa dillay masiix Ciise ibnu Maryam Rasuulkii Alle ahaa mayna dilin mana wadhin laakiin waa loo shabbahay, (ekeysiiyey), kuwii isku khilaafay Ciise waxay kaga sugan yihiin shaki, wax cilmi ahna uma leh oon ahayn raacid male umana dilin dhab.

بَل رَّفَعَهُ ٱللَّهُ إِلَيْهِ ۚ وَكَانَ ٱللَّهُ عَزِيزًا حَكِيمًا ﴿١٥٨﴾

158. Saas ma aha ee waxaa u koryeelay xaggiisa Alle, Ilaahayna waa adkaade falsan.

وَإِن مِّنْ أَهْلِ ٱلْكِتَٰبِ إِلَّا لَيُؤْمِنَنَّ بِهِۦ قَبْلَ مَوْتِهِۦ ۖ وَيَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ يَكُونُ عَلَيْهِمْ شَهِيدًا ﴿١٥٩﴾

159. Ehelu kitaab kasta wuu rumeyn Ciise geeridiisa ka hor, maalinta qiyaamana wuxuu ku noqon korkooda markhaati.

Waxaa kor kooda la yeelay buurta dhuur waxaana la faray inay hoggaansamaan oo sujuudaan lagana reebay inay xad gudbaan, hase yeeshee markay buriyeen ballankii, oy ka gaaloobeen aayaadka Alle oy laayeen Nabiyadii ooy sheegeen inay quluubtoodu daboolan tahay iyo xumaantay ku sheegeen maryam iyo inay dileen Nabi Ciise iyagoon dilin Alle ayaase u "moodsiiyey" shabbahay korna yeelay waxyaalahaas iyo wax la mid ah yaa Alle u ciqaabay una lacnaday, una dulleeyey illeen xaqay diideene. Qisada Nabi Ciise iyo hooyadiina waa in loo rumeeyo sida ku cad quraanka oo ah inuu yahay addoon Alle oo Nabi ah ee san wax cibaada ah mudan, waana doqonnimo in wax Alle ka soo hadhay la caabudo. **[An-Nisaa': 154-159].**

فَبِظُلْمٍ مِّنَ ٱلَّذِينَ هَادُوا۟ حَرَّمْنَا عَلَيْهِمْ طَيِّبَٰتٍ أُحِلَّتْ لَهُمْ وَبِصَدِّهِمْ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ كَثِيرًا ﴿١٦٠﴾

160. Dulmi kuwii yuhuudoobay dartiis yaan uga reebnay korkooda wanaagga loo xalaaleeyey iyo ka celintooda jidka Alle wax badan.

161. Iyo qaadashadooda ribada iyagoo laga reebay xaggeeda iyo ku cunidda xoolaha dadka si baadil ah, waxaanna u diyaarinnay gaalada ka mid ah cadaab daran.

وَأَخْذِهِمُ ٱلرِّبَوٰا۟ وَقَدْ نُهُوا۟ عَنْهُ
وَأَكْلِهِمْ أَمْوَٰلَ ٱلنَّاسِ بِٱلْبَٰطِلِ ۚ
وَأَعْتَدْنَا لِلْكَٰفِرِينَ مِنْهُمْ عَذَابًا
أَلِيمًا ﴿١٦١﴾

162. Laakiin kuwa ku xeeldheer cilmiga oo ka mid ah iyo mu'miniintu waxay rumeyn waxa lagugu dejiyay, iyo wixii la dejiyey hortaa, iyo kuwa oogo salaadda ee bixiya zakada ee rumeeya Alle iyo maalintii dambe kuwaas waxaan siinaynaa ajir wayn.

لَّٰكِنِ ٱلرَّٰسِخُونَ فِى ٱلْعِلْمِ مِنْهُمْ
وَٱلْمُؤْمِنُونَ يُؤْمِنُونَ بِمَآ أُنزِلَ إِلَيْكَ
وَمَآ أُنزِلَ مِن قَبْلِكَ ۚ وَٱلْمُقِيمِينَ ٱلصَّلَوٰةَ ۚ
وَٱلْمُؤْتُونَ ٱلزَّكَوٰةَ وَٱلْمُؤْمِنُونَ بِٱللَّهِ
وَٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ سَنُؤْتِيهِمْ أَجْرًا
عَظِيمًا ﴿١٦٢﴾

163. Annagaa kuu waxyoonnay sidaan ugu waxyoonnay (Nabi) Nuux iyo Nabiyadii ka dambeeyey waxaanna u waxyoonnay Nabi Ibraahim, Ismaaciil, Isxaaq, Yacquub, (awlaad) faracii, Ciise, Ayuub, Yuunus, Haaruun, Sulaymaan, waxaanna siinnay Daawuudna zabuur.

* إِنَّآ أَوْحَيْنَآ إِلَيْكَ كَمَآ أَوْحَيْنَآ إِلَىٰ
نُوحٍ وَٱلنَّبِيِّـۧنَ مِنۢ بَعْدِهِۦ ۚ وَأَوْحَيْنَآ إِلَىٰٓ
إِبْرَٰهِيمَ وَإِسْمَٰعِيلَ وَإِسْحَٰقَ وَيَعْقُوبَ
وَٱلْأَسْبَاطِ وَعِيسَىٰ وَأَيُّوبَ وَيُونُسَ
وَهَٰرُونَ وَسُلَيْمَٰنَ ۚ وَءَاتَيْنَا دَاوُۥدَ
زَبُورًا ﴿١٦٣﴾

164. Iyo rasuullo aan kaaga qisoonnay horay iyo rasuullo aannaan kaaga qisoon, wuuna la hadlay Alle Nabi Muuse hadal.

وَرُسُلًا قَدْ قَصَصْنَٰهُمْ عَلَيْكَ مِن قَبْلُ
وَرُسُلًا لَّمْ نَقْصُصْهُمْ عَلَيْكَ ۚ وَكَلَّمَ ٱللَّهُ
مُوسَىٰ تَكْلِيمًا ﴿١٦٤﴾

165. Waa rasuullo bishaarayn oo digi si ayan dadka xujo ugu yeelan Alle ka dib rasuullada, Alle na waa adkaade falsan.

رُّسُلًا مُّبَشِّرِينَ وَمُنذِرِينَ لِئَلَّا يَكُونَ
لِلنَّاسِ عَلَى ٱللَّهِ حُجَّةٌۢ بَعْدَ ٱلرُّسُلِ ۚ
وَكَانَ ٱللَّهُ عَزِيزًا حَكِيمًا ﴿١٦٥﴾

Dulmigii yuhuudda yaa looga xarrimay waxyaalo u xalaal ahaa iyo jidka xaqa ah ooy ka leexiyaan dadka... Iyo cunidda xaq darro ee xoolaha dadka. Kuwa cilmiga leh ee xaqa rumeeya oo ka mida iyo kuwa rumeeya xaqa oo saladda iyo zakada guta waxay mudan ajri wayn. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu ka mid yahay Nabiyada Alle u waxyooday Alle na wuxuu u waxyooday Nabiyo badan qaar uu ka qisooday iyo qaar kalaba, waxaase waajib ah in guud ahaan loo rumeeyo inta la sheegayna gaar ahaan, xaqana la raaco. **[An-Nisaa': 160-165]**

لَّٰكِنِ ٱللَّهُ يَشْهَدُ بِمَآ أَنزَلَ إِلَيْكَ ۖ أَنزَلَهُۥ بِعِلْمِهِۦ ۖ وَٱلْمَلَٰٓئِكَةُ يَشْهَدُونَ ۚ وَكَفَىٰ بِٱللَّهِ شَهِيدًا ﴿١٦٦﴾

166. Laakiin Alle ayaa marag furi wuxuu kugu dejiyey wuxuuna ku dejiyey cilmigiisa, malaa'igtuna way marag furi, Alle na ku filan marag.

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَصَدُّوا۟ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ قَدْ ضَلُّوا۟ ضَلَٰلًۢا بَعِيدًا ﴿١٦٧﴾

167. Kuwa gaaloobay oo ka leexiya jidka Alle waay dhumeen dhumid fog.

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَظَلَمُوا۟ لَمْ يَكُنِ ٱللَّهُ لِيَغْفِرَ لَهُمْ وَلَا لِيَهْدِيَهُمْ طَرِيقًا ﴿١٦٨﴾

168. Kuwa gaaloobay ee dulmi falay ma aha Alle kii u dambi dhaafa ama ku hanuuniya jid.

إِلَّا طَرِيقَ جَهَنَّمَ خَٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدًا ۚ وَكَانَ ذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ يَسِيرًا ﴿١٦٩﴾

169. Jidka jahannamo mooyee iyagoo ku waari waligood, arrintaasna waa u fududdahay Alle.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ قَدْ جَآءَكُمُ ٱلرَّسُولُ بِٱلْحَقِّ مِن رَّبِّكُمْ فَـَٔامِنُوا۟ خَيْرًا لَّكُمْ ۚ وَإِن تَكْفُرُوا۟ فَإِنَّ لِلَّهِ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ وَكَانَ ٱللَّهُ عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿١٧٠﴾

170. Dadow wuxuu idiinla yimid Rasuulku xaq xagga Alle ee rumeeya (xaqa) saasaa idiin khayr roon, haddaad gaalowdaanna Alle waxaa u sugnaaday waxa ku sugan samaawaadka iyo dhulka Alle na waa oge falsan.

يَٰٓأَهْلَ ٱلْكِتَٰبِ لَا تَغْلُوا۟ فِى دِينِكُمْ وَلَا تَقُولُوا۟ عَلَى ٱللَّهِ إِلَّا ٱلْحَقَّ ۚ إِنَّمَا ٱلْمَسِيحُ عِيسَى ٱبْنُ مَرْيَمَ رَسُولُ ٱللَّهِ

171. Ehelu kitaabkoow ha ku xadgudbina diintiinna hana ku dhihina Alle waxaan xaq ahayn, masiix Ciise ibnu

وَكَلِمَتُهُۥٓ أَلْقَىٰهَآ إِلَىٰ مَرْيَمَ وَرُوحٌ مِّنْهُ ۖ فَـَٔامِنُوا۟ بِٱللَّهِ وَرُسُلِهِۦ ۖ وَلَا تَقُولُوا۟ ثَلَٰثَةٌ ۚ ٱنتَهُوا۟ خَيْرًا لَّكُمْ ۚ إِنَّمَا ٱللَّهُ إِلَٰهٌ وَٰحِدٌ ۖ سُبْحَٰنَهُۥٓ أَن يَكُونَ لَهُۥ وَلَدٌ ۘ لَّهُۥ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِى ٱلْأَرْضِ ۗ وَكَفَىٰ بِٱللَّهِ وَكِيلًا ﴿١٧١﴾

Maryam waa uun Rasuulkii Alle iyo kalimadiisii uu ku tuuray Maryama iyo ruux xaggiisa ah ee rumeeya Alle iyo rasuulladiisa, hana dhihina saddex (ilaah), reebtooma, saasaa idiin khayr roon, Alle waa uun ilaah kaliya, waa ka nasahan yahay in ilmo u sugnaado, waxaa u sugnaaday waxa samaawaadka iyo dhulka ku sugan, Alle ayaana ku filan wakiil.

Alle ayaa wax walba og, cid dhuntayna way khasaartay waxayna la kulmi ciqaab. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu la yimid xaq cad. Mana habboona in Nabi Ciise iyo diinta lagu xadgudbo, Ciisena waa addoon Alle, Ilaahay waa kali, saddex ilaahna ma jirto oo waa uun Alle kaliya, wehel iyo carruurna uma baahna. **[An-Nisaa': 166-171].**

لَّن يَسْتَنكِفَ ٱلْمَسِيحُ أَن يَكُونَ عَبْدًا لِّلَّهِ وَلَا ٱلْمَلَٰٓئِكَةُ ٱلْمُقَرَّبُونَ ۚ وَمَن يَسْتَنكِفْ عَنْ عِبَادَتِهِۦ وَيَسْتَكْبِرْ فَسَيَحْشُرُهُمْ إِلَيْهِ جَمِيعًا ﴿١٧٢﴾

172. Iskama kibriyo masiix inuu ahaado addoon Alle, malaa'igta la dhaweeyeyna (iskama kibriso), ruuxii iska kibriya cibaadadiisa oo iswayneeya wuu u soo kulmin xaggiisa dhammaan.

فَأَمَّا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ فَيُوَفِّيهِمْ أُجُورَهُمْ وَيَزِيدُهُم مِّن فَضْلِهِۦ ۖ وَأَمَّا ٱلَّذِينَ ٱسْتَنكَفُوا۟ وَٱسْتَكْبَرُوا۟ فَيُعَذِّبُهُمْ عَذَابًا أَلِيمًا وَلَا يَجِدُونَ لَهُم مِّن دُونِ ٱللَّهِ وَلِيًّا وَلَا نَصِيرًا ﴿١٧٣﴾

173. Kuwa rumeeyey xaqa oo camal fiican fala wuxuu u oofin ajrigooda wuxuuna u kordhin fadligiisa, kuwa iska wayneeya oo iskibriya wuxuu cadaabi cadaab daran mana helayaan Alle ka sokow wali iyo gargaare (midna).

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ قَدْ جَآءَكُم بُرْهَٰنٌ مِّن رَّبِّكُمْ وَأَنزَلْنَآ إِلَيْكُمْ نُورًا مُّبِينًا ﴿١٧٤﴾

174. Dadow waxaa idiin yimid xujo xagga Alle ah waxaanan idiin soo dejinnay nuur cad.

فَأَمَّا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ بِٱللَّهِ وَٱعۡتَصَمُواْ بِهِۦ فَسَيُدۡخِلُهُمۡ فِي رَحۡمَةٖ مِّنۡهُ وَفَضۡلٖ وَيَهۡدِيهِمۡ إِلَيۡهِ صِرَٰطٗا مُّسۡتَقِيمًا ١٧٥

175. Kuwa rumeeyase Alle oo qabsaday (isku dhawray) Alle (iyo quraanka) wuxuu galin naxariis xaggiisa ah iyo fadli wuxuuna ku hanuunin xaggiisa jid toosan.

يَسۡتَفۡتُونَكَ قُلِ ٱللَّهُ يُفۡتِيكُمۡ فِي ٱلۡكَلَٰلَةِۚ إِنِ ٱمۡرُؤٌاْ هَلَكَ لَيۡسَ لَهُۥ وَلَدٞ وَلَهُۥٓ أُخۡتٞ فَلَهَا نِصۡفُ مَا تَرَكَۚ وَهُوَ يَرِثُهَآ إِن لَّمۡ يَكُن لَّهَا وَلَدٞۚ فَإِن كَانَتَا ٱثۡنَتَيۡنِ فَلَهُمَا ٱلثُّلُثَانِ مِمَّا تَرَكَۚ وَإِن كَانُوٓاْ إِخۡوَةٗ رِّجَالٗا وَنِسَآءٗ فَلِلذَّكَرِ مِثۡلُ حَظِّ ٱلۡأُنثَيَيۡنِۗ يُبَيِّنُ ٱللَّهُ لَكُمۡ أَن تَضِلُّواْۗ وَٱللَّهُ بِكُلِّ شَيۡءٍ عَلِيمُۢ ١٧٦

176. Waxbay ku warsan, waxaad dhahdaa Alle ayaa idiin fidyoon kalaalada, hadduu dhinto ruux aan ilmo lahayn oo leh walaashiis, waxay mudan nus wuxuu ka tagay, isaguna wuu dhaxli hadduusan iyada ilmo u sugnaannin, hadday labo yihiinna waxay mudan saddex dalooloo labo dalool wuxuu ka tagay, hadday yihiin walaal rag iyo haween ah kan lab waxaa u sugnaaday labo dhadig qaybtood, wuxuu idiin caddayn Alle (xaqa) inaydaan dhumin Alle na wax kasta waa og yahay.

Ciddii iska kibrisa ama iska waynaysa cibaadada Alle wuxuu la kulmi Alle wuuna abaal marin, Nabi Ciise iyo malaa'igta Alle na iskama kibriyaan. Mana habboona in cidna iska waynayso cibaadada Alle. Suuradduna waxay ku dhammaatay waxay ku billaabatay oo ah dhaxalka si aan loo dhumin xaqana looga leexan ee loo raaco qaybta Alle iyo sharcigiisa caadilka ah. **[An-Nisaa': 172-176].**

Suurat Al-Maa'idah

سُورَةُ ٱلْمَائِدَةِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ أَوۡفُواْ بِٱلۡعُقُودِۚ أُحِلَّتۡ لَكُم بَهِيمَةُ ٱلۡأَنۡعَٰمِ إِلَّا مَا يُتۡلَىٰ عَلَيۡكُمۡ غَيۡرَ مُحِلِّي ٱلصَّيۡدِ وَأَنتُمۡ حُرُمٌۗ إِنَّ ٱللَّهَ يَحۡكُمُ مَا يُرِيدُ ١

1. Kuwa (xaqa) rumeeyoow oofiya ballanka, waxaa laydiin banneeyey xoolaha nicmoolayda waxa laydinku akhrin korkiinna mooyee idinkoon bannaysanayn ugaadhsiga idinkoo xarman, Alle na wuxuu xukumaa wuxuu doono.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تُحِلُّواْ شَعَٰٓئِرَ ٱللَّهِ وَلَا ٱلشَّهۡرَ ٱلۡحَرَامَ وَلَا ٱلۡهَدۡيَ وَلَا ٱلۡقَلَٰٓئِدَ وَلَآ ءَآمِّينَ ٱلۡبَيۡتَ ٱلۡحَرَامَ يَبۡتَغُونَ فَضۡلٗا مِّن رَّبِّهِمۡ وَرِضۡوَٰنٗاۚ وَإِذَا حَلَلۡتُمۡ فَٱصۡطَادُواْۚ وَلَا يَجۡرِمَنَّكُمۡ شَنَـَٔانُ قَوۡمٍ أَن صَدُّوكُمۡ عَنِ ٱلۡمَسۡجِدِ ٱلۡحَرَامِ أَن تَعۡتَدُواْۘ وَتَعَاوَنُواْ عَلَى ٱلۡبِرِّ وَٱلتَّقۡوَىٰۖ وَلَا تَعَاوَنُواْ عَلَى ٱلۡإِثۡمِ وَٱلۡعُدۡوَٰنِۚ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَۖ إِنَّ ٱللَّهَ شَدِيدُ ٱلۡعِقَابِ ٢

2. Kuwa (xaqa) rumeeyow ha bannaysanina calaamooyinka Alle (waxa reebban) iyo bisha xurmaysan iyo hadyada iyo midda loo luqun xidhay (hadyada baydka) iyo kuwa u qasdi baydka xurmaysan, iyagoo dooni fadliga Rabbigood iyo raalli ahaanshihiisa, markaad xalaalowdaanna (dhammaysaan xajka iyo cumrada) ugaadhsada (haddaad doontaan), yeyna idin ku xambaarin cadhada qoom idinka celiyey masaajidka xurmaysan inaad xad gudubtaan, isugu kaalmeeya samaha iyo dhawrsiga hana isugu

kaalmaynina dambi iyo colnimo, kana dhawrsada Alle, Ilaahay way daran tahay ciqaabtiisu.

Suuraddan waxaa la dhahaa suuratul maa'ida, waxayna kulmisatay xukummo badan, aayadahanna wuxuu Alle fari dadka inay oofiyaan ballamada wuxuuna u caddeeyey in loo banneeyey cunnada xoolaha marka laga reebo waxa lagu akhriyey iyo ugaadhsiga iyagoo xarman, wuxuuna ku boorriyey inayna ku xad gudbin kuna dacatiyin, calaamadda Alle iyo waynaantiisa, iyo bisha xurmaysan, iyo hadyada la calaameeyey iyo kuwa ku socda guriga xurmaysan, iyagoo dooni khayrka Alle iyo raalli ahaanshihiisa, markay xalaaloobaanna way ugaadhsan karaan, mana habboona in caddaaladda sina looga tago, waase in khayrka laysugu kaalmeeyo oon xumaanta laysugu kaalmaynin, illeen waxaa daran ciqaabta Alle. Caa'isha waxay tidhi: suuraddan waa wixii u dagid dambeeyey ee waxay bannaysana cuna waxay reebtana daaya. **[Al-Maa'idah: 1-2].**

حُرِّمَتْ عَلَيْكُمُ ٱلْمَيْتَةُ وَٱلدَّمُ
وَلَحْمُ ٱلْخِنزِيرِ وَمَآ أُهِلَّ لِغَيْرِ ٱللَّهِ
بِهِۦ وَٱلْمُنْخَنِقَةُ وَٱلْمَوْقُوذَةُ وَٱلْمُتَرَدِّيَةُ
وَٱلنَّطِيحَةُ وَمَآ أَكَلَ ٱلسَّبُعُ إِلَّا مَا
ذَكَّيْتُمْ وَمَا ذُبِحَ عَلَى ٱلنُّصُبِ وَأَن
تَسْتَقْسِمُوا۟ بِٱلْأَزْلَٰمِ ۚ ذَٰلِكُمْ فِسْقٌ ۗ
ٱلْيَوْمَ يَئِسَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مِن
دِينِكُمْ فَلَا تَخْشَوْهُمْ وَٱخْشَوْنِ ۚ ٱلْيَوْمَ
أَكْمَلْتُ لَكُمْ دِينَكُمْ وَأَتْمَمْتُ
عَلَيْكُمْ نِعْمَتِى وَرَضِيتُ لَكُمُ
ٱلْإِسْلَٰمَ دِينًا ۚ فَمَنِ ٱضْطُرَّ فِى مَخْمَصَةٍ
غَيْرَ مُتَجَانِفٍ لِّإِثْمٍ فَإِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ
رَّحِيمٌ ﴿٣﴾

3. Waxaa laydinka xarrimay bakhtiga iyo dhiigga iyo hilibka doofaarka iyo wixii lagu xuso (lagu gawraco) waxaan magaca Alle ahayn, iyo tii la ceejiyo, iyo la ganac gooyo, iyo tan meel ku dhacda, iyo tii la hardiyo, iyo midduu cunay bahal, waxaad gawracdaan mooyee, (waxaa kaloo reebban) wixii lagu gawraco sanam, iyo inaad ku nasiib doontaan faal, kaasi waa fisqi, maantayna ka quusteen kuwii gaaloobay diintiinna, ee ha ka cabsannina ee iga cabsada, maantaan idiin kaamilay (dhammeeyey) diintiinna waxaana idiin taam yeelay korkiinna nicmadayda waxaana idiinka raalli noqday islaamka diin ahaan, ciddii loo dhibaateeyo baahi inay cunaan wixii laga xaaraameeyey oon u

kaseyn dambi, Alle waa dambi dhaafe naxariista.

4. Waxay ku warsan maxaa loo xalaaleeyey waxaad dhahdaa waxaa laydiin xallilay wanaagga (xalaasha) iyo waxaad wax barteen oo wax dhaawaca idinkoo ku ugaadhsan, ood baraysaan wuxuu idin baray Alle ee ka cuna waxay idiin qabtaan ku xusana magaca Alle kana dhawrsada Alle, Ilaahay waa deg degtaa xisaabtiisuye.

يَسْـَٔلُونَكَ مَاذَآ أُحِلَّ لَهُمْ ۖ قُلْ أُحِلَّ
لَكُمُ ٱلطَّيِّبَٰتُ وَمَا عَلَّمْتُم مِّنَ
ٱلْجَوَارِحِ مُكَلِّبِينَ تُعَلِّمُونَهُنَّ مِمَّا
عَلَّمَكُمُ ٱللَّهُ ۖ فَكُلُوا۟ مِمَّآ أَمْسَكْنَ
عَلَيْكُمْ وَٱذْكُرُوا۟ ٱسْمَ ٱللَّهِ عَلَيْهِ ۖ
وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ سَرِيعُ ٱلْحِسَابِ ﴿٤﴾

Waxa wax dhiboo dhan Alle wuu reebay, sida bakhtiga, dhiigga, hilibka doofaarka iyo wixii magaca Alle waxaan ahayn lagu gawracay, waxaa si gaar ah loo sheegay inay reebban tahay tan la ceejiyo, tan la ganac gooyo, tan meel ka dhacda, tan hardida ku dhimata, tan bahal cuno oon la gawricin, waxaa kaloo reebban waxa sanamyada loo gawraco iyo waxyaalo la taagay, iyo wax lagu sameeyo faal, waxaasuna waa faasiqnimo, maalintaas yeyna ka quusteen gaaladu diinta islamka, mana mudna in laga cabsado ee waa in Alle uun laga cabsado, Alle na wuu taam yeelay diinta islaamka ah iyo nicmadiisa, wuxuuna inooga raalli noqday diinta islaamka waxa ka soo hadhayna waa wax kama jiraan, ciddiise baahata oon xadgudbin Alle waa u dhaafe naxariista. **[Al-Maa'idah: 3-4].**

5. Maanta waxaa laydiin xalaaleeyey wanaagga, cunnada kuwa la siiyey kitaabna xalaal buu idiin yahay, cunnadiinnuna xalaal bay u tahay, iyo kuwa dhawrsoon oo mu'minaadka ah (guurkooda) iyo kuwa dhawrsoon oo ka mid ah kuwa la siiyey kitaabka oo idinka horreeyey haddaad siisaan ujuuradooda (meherkooda) idinkoo dhawrsoon oon xumaan (zino muuqata) samaynayn

ٱلْيَوْمَ أُحِلَّ لَكُمُ ٱلطَّيِّبَٰتُ ۖ وَطَعَامُ
ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْكِتَٰبَ حِلٌّ لَّكُمْ
وَطَعَامُكُمْ حِلٌّ لَّهُمْ ۖ وَٱلْمُحْصَنَٰتُ
مِنَ ٱلْمُؤْمِنَٰتِ وَٱلْمُحْصَنَٰتُ مِنَ
ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْكِتَٰبَ مِن قَبْلِكُمْ إِذَآ
ءَاتَيْتُمُوهُنَّ أُجُورَهُنَّ مُحْصِنِينَ غَيْرَ
مُسَٰفِحِينَ وَلَا مُتَّخِذِىٓ أَخْدَانٍ ۗ وَمَن
يَكْفُرْ بِٱلْإِيمَٰنِ فَقَدْ حَبِطَ عَمَلُهُۥ
وَهُوَ فِى ٱلْـَٔاخِرَةِ مِنَ ٱلْخَٰسِرِينَ ﴿٥﴾

yeelanaynna saaxiibbo (aad qarsanaysaan) ciddii ka gaalowda iimaanka wuu hoobtay camalkiisu wuxuuna ka mid noqon aakhiro kuwa khasaaray.

6. Kuwa (xaqa) rumeeyow haddaad u kacdaan salaadda dhaqa wajiyadiinna, iyo gacmihiinna tan iyo jiqilka (xusulka) masaxana madaxiinna (dhaqana) lugihiina tan iyo anqawyada, haddaad janaabo qabtaan isdaahiriya, haddaad buktaan ama safar tihiin ama ka timaadaan kortag ama istaabataan haween oydaan helayn biyo ku gagabaysta dhul daahir ah kuna masaxa wajigiinna iyo gacmihiinna, idin lama doonayo Alle inuu idin yeelo korkiinna dhib wuxuuse dooni inuu idin daahiriyo idiin dhammeeyo nicmadiisa korkiinna inaad shugridaan darteed.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِذَا قُمْتُمْ إِلَى
ٱلصَّلَوٰةِ فَٱغْسِلُواْ وُجُوهَكُمْ وَأَيْدِيَكُمْ
إِلَى ٱلْمَرَافِقِ وَٱمْسَحُواْ بِرُءُوسِكُمْ
وَأَرْجُلَكُمْ إِلَى ٱلْكَعْبَيْنِ ۚ وَإِن
كُنتُمْ جُنُبًا فَٱطَّهَّرُواْ ۚ وَإِن كُنتُم مَّرْضَىٰٓ
أَوْ عَلَىٰ سَفَرٍ أَوْ جَآءَ أَحَدٌ مِّنكُم مِّنَ
ٱلْغَآئِطِ أَوْ لَـٰمَسْتُمُ ٱلنِّسَآءَ فَلَمْ تَجِدُواْ
مَآءً فَتَيَمَّمُواْ صَعِيدًا طَيِّبًا فَٱمْسَحُواْ
بِوُجُوهِكُمْ وَأَيْدِيكُم مِّنْهُ ۚ مَا يُرِيدُ
ٱللَّهُ لِيَجْعَلَ عَلَيْكُم مِّنْ حَرَجٍ
وَلَـٰكِن يُرِيدُ لِيُطَهِّرَكُمْ وَلِيُتِمَّ نِعْمَتَهُۥ
عَلَيْكُمْ لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ٦

Halkan wuxuu Alle ku sheegay in loo banneeyey mu'miinta cunnada xalaasha ah, iyo cunnada kuwa kitaabka leh, iyo haweenka dhawrsoon oo mu'miinta ah, iyo kuwa kitaabka leh ee naga horreeyey marka la siiyo maherkooda ee dhawrsoon, ciddiise xaqa iyo iimaanka ka gaalowda waa mid uu buray camalkiisu oo khasaaray. Sayid Cumar waxaa laga sheegay: waxaan doonay inaanan u oggolaan ruux xumaan (zino) sameeyey inuu guursado haweenay dhawrsoon. Aayadda kale waxay ka warrami waysada iyo in la dhaqi wajiga, gacmaha tan iyo jiqillada, madaxana la masixi, lugahana la dhaqi tan iyo anqawyada, janaabadana laga maydhan, ciddii jirran ama safar ah ama kortag ka timid ama haween taabta oon biya helinna inuu carrada ku gagabaysan oo marin wajiga iyo gacmaha, waana fududayn Alle iyo inuu idiin muujiyo nicmadiisa iyo inaan ku mahdinno. **[Al-Maa'idah: 5-6].**

وَٱذْكُرُواْ نِعْمَةَ ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ وَمِيثَٰقَهُ ٱلَّذِى وَاثَقَكُم بِهِۦٓ إِذْ قُلْتُمْ سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا ۖ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلِيمٌۢ بِذَاتِ ٱلصُّدُورِ ﴿٧﴾

7. Xusuusta nicmada Alle iyo ballankiisa uu idin kula ballamay markaad dhahdeen waan maqallay waana adeecnay, kana dhawrsada Alle illeen Ilaahay waa og yahay waxa laabta ku sugane.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ كُونُواْ قَوَّٰمِينَ لِلَّهِ شُهَدَآءَ بِٱلْقِسْطِ ۖ وَلَا يَجْرِمَنَّكُمْ شَنَـَٔانُ قَوْمٍ عَلَىٰٓ أَلَّا تَعْدِلُواْ ۚ ٱعْدِلُواْ هُوَ أَقْرَبُ لِلتَّقْوَىٰ ۖ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ خَبِيرٌۢ بِمَا تَعْمَلُونَ ﴿٨﴾

8. Kuwa (xaqa) rumeeyow noqda kuwa istaaga (u darban) dar Alle oo ku marag kaca caddaalad, yeyna idinku xambaarin cadhada qoom inaydaan caddaalad falin, caddaalad fala iyadaa u dhaw dhawrsashada (Alle) kana dhawrsada ilaahay, Alle waa og yahay waxaad falaysaane.

وَعَدَ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ لَهُم مَّغْفِرَةٌ وَأَجْرٌ عَظِيمٌ ﴿٩﴾

9. Wuxuu u yaboohay Alle kuwa rumeeyey (xaqa) oo falay camal fiican inuu u sugnaaday dambi dhaaf iyo ajir wayn.

وَٱلَّذِينَ كَفَرُواْ وَكَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِنَآ أُوْلَٰٓئِكَ أَصْحَٰبُ ٱلْجَحِيمِ ﴿١٠﴾

10. Kuwa gaaloobay oo beeniyey aayaadkannaga kuwaasu waa asaxaabta (ehelka) jaxiimo.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱذْكُرُواْ نِعْمَتَ ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ إِذْ هَمَّ قَوْمٌ أَن يَبْسُطُوٓاْ إِلَيْكُمْ أَيْدِيَهُمْ فَكَفَّ أَيْدِيَهُمْ عَنكُمْ ۖ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ ۚ وَعَلَى ٱللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ ٱلْمُؤْمِنُونَ ﴿١١﴾

11. Kuwa (xaqa) rumeeyow xusuusta nicmada Alle korkiinna markay hammiyeen "dooneen" qoom inay idinku fidiyaan (xumaan) gacmahooda oo (Alle) idinka reebay gacmohooda xaggiinna, kana dhawrsada Alle, ilaahayna ha tala saarteen mu'miniintu.

Aayadahan wuxuu Alle fari dadka mu'miniinta ah inay xusuustaan nicmadiisa oo ah inuu u soo dejiyey sharcigan toosan, una soo diray rasuul, iyo ballankii uu ka qaaday inay xaqa u gargaaraan oyna aqbaleen, iyo inay Allaha wax walba

og ka dhawrsadaan, waxaa kale oo uu faray inay caddaaladda ku dadaalaan xaataa dadkay colka yihiin saasaana u dhaw xaqa iyo wanaagga, markaasuu Alle caddeeyey abaalka kuwa wanaagga fala iyo kuwa gaaloobay, iyo in Alle ka dhawray cadaw isku dayey inay xumaan ku falaan, oyna mudan yihiin inay Alle tala saartaan, waxaa sugnaatay inay muslimiinti la ballantemeen Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) si kastoo ay yihiinba inay xaqa u gargaaraan. Alle na waa kan ka dhawray Nabiga cadowgii isku dayey inuu wax yeelleeyo, yuhuud iyo kuwa kalaba. **[Al-Maa'idah: 7-11].**

12. Dhab ahaan buu u qaaday Alle ballanka banii'israa'iil, waxaana ka bixinnay xaggooda labo iyo toban madax ah, wuxuuna yidhi Alle anigu waan idin la jiraa haddaad oogtaan salaadda oo bixisaan zakada ood rumaysaan rasuulladayda, ood una gargaartaan oo amaah gashataan Alle amaah (sadaqo) fiican waxaan ka asturi xaggiinna xumaanta waxaanna idin galin jannooyin ay dureeri dhexdeeda wabiyaal, ruuxii gaalooba intaas ka dib oo idin ka mid ah wuxuu ka dhumay jidka toosan.

* وَلَقَدْ أَخَذَ ٱللَّهُ مِيثَٰقَ بَنِيٓ إِسْرَٰٓءِيلَ
وَبَعَثْنَا مِنْهُمُ ٱثْنَىْ عَشَرَ نَقِيبًا ۖ وَقَالَ
ٱللَّهُ إِنِّى مَعَكُمْ ۖ لَئِنْ أَقَمْتُمُ ٱلصَّلَوٰةَ
وَءَاتَيْتُمُ ٱلزَّكَوٰةَ وَءَامَنتُم بِرُسُلِى
وَعَزَّرْتُمُوهُمْ وَأَقْرَضْتُمُ ٱللَّهَ قَرْضًا
حَسَنًا لَّأُكَفِّرَنَّ عَنكُمْ سَيِّـَٔاتِكُمْ
وَلَأُدْخِلَنَّكُمْ جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا
ٱلْأَنْهَٰرُ ۚ فَمَن كَفَرَ بَعْدَ ذَٰلِكَ مِنكُمْ
فَقَدْ ضَلَّ سَوَآءَ ٱلسَّبِيلِ ﴿١٢﴾

13. Burintooda ballankooda (yuhuud) yaan u lacnadnay kana yeellay quluubtooda mid ingagan, iyagoo ka leexin kalimada meesheeda waxayna halmaameen qayb ka mid ah wixii lagu waaniyey kamana waydid xaggooda inaad ku aragtid khayaamo wax yar mooyee ee iska cafi iskana

فَبِمَا نَقْضِهِم مِّيثَٰقَهُمْ لَعَنَّٰهُمْ وَجَعَلْنَا
قُلُوبَهُمْ قَٰسِيَةً ۖ يُحَرِّفُونَ ٱلْكَلِمَ عَن
مَّوَاضِعِهِۦ وَنَسُوا۟ حَظًّا مِّمَّا ذُكِّرُوا۟ بِهِۦ ۚ
وَلَا تَزَالُ تَطَّلِعُ عَلَىٰ خَآئِنَةٍ مِّنْهُمْ إِلَّا
قَلِيلًا مِّنْهُمْ ۖ فَٱعْفُ عَنْهُمْ وَٱصْفَحْ ۚ إِنَّ
ٱللَّهَ يُحِبُّ ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿١٣﴾

saamax Alle wuxuu jecel yahay samo falayaashee.

Halkanna wuxuu Alle ka qisoon banii israa'iil iyo in Alle ka soo saaray labo iyo toban madax ah kuna yidhi waan idinla jiraa haddaad oogtaan salaadda, oo bixisaan zakada, ood rumaysaan rasuulladayda, ood u gargaartaan ood wanaag Alle amaahsataan, uuna asturi xumaantooda uuna galin jannooyin ay dureeri dhexdeeda wabiyaal, ciddiise ka dib gaalowda wuxuu ka dhumay jidka toosan. Waase la lacnaday qalbi ingeeggooda iyo ka leexinta hadalka meelihiisa, waxayna halmaameen wax badan oo lagu waaniyey, khayaamana lagama waayo badankooda, ee iska dhaaf hana ku dhibin naftaada Alle wuxuu jecel yahay samafaleyaashee. Waana taas dabeecadda yuhuud iyo wixii la mid ah, waxaase waajib ah in laga digtoonaadaa layskuna dayo in la toosiyo. **[Al-Maa'idah: 12-13].**

وَمِنَ ٱلَّذِينَ قَالُوٓاْ إِنَّا نَصَٰرَىٰٓ أَخَذۡنَا مِيثَٰقَهُمۡ فَنَسُواْ حَظّٗا مِّمَّا ذُكِّرُواْ بِهِۦ فَأَغۡرَيۡنَا بَيۡنَهُمُ ٱلۡعَدَٰوَةَ وَٱلۡبَغۡضَآءَ إِلَىٰ يَوۡمِ ٱلۡقِيَٰمَةِۚ وَسَوۡفَ يُنَبِّئُهُمُ ٱللَّهُ بِمَا كَانُواْ يَصۡنَعُونَ ١٤

14. Kuwa yidhi waxaan nahay nasaara waxaan ka qaadnay ballankooda waxayna halmaameen qayb wixii lagu waaniyey, markaasaan ku sii daynay dhexdooda colnimo iyo cadho tan iyo maalinta qiyaame, wuuna uga warrami Alle waxay samaynayeen.

يَٰٓأَهۡلَ ٱلۡكِتَٰبِ قَدۡ جَآءَكُمۡ رَسُولُنَا يُبَيِّنُ لَكُمۡ كَثِيرٗا مِّمَّا كُنتُمۡ تُخۡفُونَ مِنَ ٱلۡكِتَٰبِ وَيَعۡفُواْ عَن كَثِيرٖۚ قَدۡ جَآءَكُم مِّنَ ٱللَّهِ نُورٞ وَكِتَٰبٞ مُّبِينٞ ١٥

15. Ehelu kitaabow waxaa idiin yimid Rasuulkannaga oo idiin caddayn wax badan ood ahaydeen kuwo ka qariya kitaabka (tawreed) wuxuuna idinka cafiyi wax badan, waxaana idiinka yimid xagga Alle nuur iyo kitaab cad.

يَهۡدِي بِهِ ٱللَّهُ مَنِ ٱتَّبَعَ رِضۡوَٰنَهُۥ سُبُلَ ٱلسَّلَٰمِ وَيُخۡرِجُهُم مِّنَ ٱلظُّلُمَٰتِ إِلَى ٱلنُّورِ بِإِذۡنِهِۦ وَيَهۡدِيهِمۡ إِلَىٰ صِرَٰطٖ مُّسۡتَقِيمٖ ١٦

16. Uuna ku hanuuniyo Alle ruuxii raaca raalli ahaanshihiisa jidka nabadgalyada kana bixin mugdiyada una bixin xagga nuurka, idinkiisa, kuna hanuunin jidka toosan.

17. Waxaa gaaloobay kuwa yidhi Alle waa uun masiixi ibnu Maryama, yaa uga hanan Alle waxba hadduu doono inuu halaago masiixi ibnu Maryama iyo hooyadiis iyo waxa dhulka ku sugan dhammaan, Alle ayaa iska leh xukunka samooyinka iyo dhulka, iyo waxa u dhaxeeya, wuxuuna abuuraa wuxuu doono Alle na wax kasta wuu karaa.

لَّقَدْ كَفَرَ ٱلَّذِينَ قَالُوٓاْ إِنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلْمَسِيحُ ٱبْنُ مَرْيَمَۚ قُلْ فَمَن يَمْلِكُ مِنَ ٱللَّهِ شَيْـًٔا إِنْ أَرَادَ أَن يُهْلِكَ ٱلْمَسِيحَ ٱبْنَ مَرْيَمَ وَأُمَّهُۥ وَمَن فِى ٱلْأَرْضِ جَمِيعًاۗ وَلِلَّهِ مُلْكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَاۚ يَخْلُقُ مَا يَشَآءُۚ وَٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿١٧﴾

Kuwa sheegta inay nasaara yihiin wuxuu Alle ka qaaday ballan inay rumeeyaan una gargaaraan Nabiga Muxamad ah (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wayse halmaameen oo iska diideen arrintaas, markaasaa Alle dhex dhigay col iyo cadho tan iyo qiyaame, Alle na wuu uga warrami oo ka abaal marin waxay falayeen. Ehelu kitaabkow waxaa idiin yimid rasuulka Alle oo idiin caddayn wax badan ood qarinaysaan, idinka cafin wax badan, xagga Alle na waxaa idiinka yimid nuur iyo quraan cad kuna hanuuniyo Alle jidka nabadgalyo ciddii raacda raalli ahaanshihiisa, iyo jidka nuurka ah ee toosan. Waxaa dhab u gaaloobay kuwa yidhi Alle waa Ciise ibnu Maryama, yaase Alle ka celin hadduu halaago Ciise iyo hooyadiis iyo waxa dhulka ku sugan dhammaan. Xukunka samooyinka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeyana Alle ayaa iska leh, wuxuu doono yuu abuuraa, wax walbana wuu karaa, Alle na waa kali awood leh. **[Al-Maa'idah: 14-17].**

18. Waxay dheheen yuhuud iyo nasaaraba annagu waxaan nahay carruur Alle iyo kuwuu jecel yahay waxaad dhahdaa muxuu idiinku cadaabaa dambigiinna, saas ma aha ee waxaad tihiin dadka Alle abuuray kuwo ka mid ah, wuu u dhaafi cidduu doono wuuna cadaabi cidduu doono, Alle na waxaa u sugnaaday xukunka samooyinka, iyo dhulka iyo waxa u dhexeeya, xaggiisaana loo ahaan.

وَقَالَتِ ٱلْيَهُودُ وَٱلنَّصَٰرَىٰ نَحْنُ أَبْنَٰٓؤُاْ ٱللَّهِ وَأَحِبَّٰٓؤُهُۥۚ قُلْ فَلِمَ يُعَذِّبُكُم بِذُنُوبِكُمۖ بَلْ أَنتُم بَشَرٌ مِّمَّنْ خَلَقَۚ يَغْفِرُ لِمَن يَشَآءُ وَيُعَذِّبُ مَن يَشَآءُۚ وَلِلَّهِ مُلْكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَاۖ وَإِلَيْهِ ٱلْمَصِيرُ ﴿١٨﴾

يَٰٓأَهۡلَ ٱلۡكِتَٰبِ قَدۡ جَآءَكُمۡ رَسُولُنَا يُبَيِّنُ لَكُمۡ عَلَىٰ فَتۡرَةٖ مِّنَ ٱلرُّسُلِ أَن تَقُولُواْ مَا جَآءَنَا مِنۢ بَشِيرٖ وَلَا نَذِيرٖۖ فَقَدۡ جَآءَكُم بَشِيرٞ وَنَذِيرٞۗ وَٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَيۡءٖ قَدِيرٞ ١٩

19. Ehelu kitaabow waxaa idiin yimid Rasuulkannagii isagoo idiin caddayn muddo (kadib) rasuullada inaydaan dhihin nooma imaan bishaareeye iyo dige, Allana wax kasta wuu karaa.

وَإِذۡ قَالَ مُوسَىٰ لِقَوۡمِهِۦ يَٰقَوۡمِ ٱذۡكُرُواْ نِعۡمَةَ ٱللَّهِ عَلَيۡكُمۡ إِذۡ جَعَلَ فِيكُمۡ أَنۢبِيَآءَ وَجَعَلَكُم مُّلُوكٗا وَءَاتَىٰكُم مَّا لَمۡ يُؤۡتِ أَحَدٗا مِّنَ ٱلۡعَٰلَمِينَ ٢٠

20. (Xusuuso) markuu ku yidhi (Nabi) Muuse qoomkiisa, qoomkayow xusuusta nicmada Alle ee korkiinna markuu yeelay dhexdiinna Nabiyo idinkana yeelay xukaam idin siiyeyna waxaan la siin cid caalamka ah, (waqtigiinnii).

يَٰقَوۡمِ ٱدۡخُلُواْ ٱلۡأَرۡضَ ٱلۡمُقَدَّسَةَ ٱلَّتِي كَتَبَ ٱللَّهُ لَكُمۡ وَلَا تَرۡتَدُّواْ عَلَىٰٓ أَدۡبَارِكُمۡ فَتَنقَلِبُواْ خَٰسِرِينَ ٢١

21. Qoomkayow gala dhulka la daahiriyey oo uu idiin yaboohay Alle hana u noqonnina gadaashiinna oo gaddoontaan idinkoo khasaaray.

Yuhuud iyo nasaara iyo gaaladaba waxay ku hadlaan haddallo xun, siday halkan ku sheegeen inay yihiin caruurtii Alle, iyo kuwo uu jecel yahay, taasise waa been ee waa dad ka mid ah khalqiga uu abuuray, wuuna cadaabi, Alle na wuu ka deeqtoon yahay khalqiga, waxaana u sugnaaday cirka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya xaggiisaana loo ahaan. Waxaanna idiin soo diray Rasuulkannaga muddo rasuullada ka dib, saydaan u dhihin nooma imaan bishaareeye iyo dige, wuuse idiin yimid, Nabi Muusena wuu waaniyey banii israa'iil wuxuuna xusuusiyey nicmada Alle iyo Nabiyada uu u soo diray kana yeelay xukaam waqtigoodii, wuxuuna faray inay galaan dhulka daahirka ah qudsi. Waxaana wax laga xishooda ah magaaladaas barakaysan in gaalada yahuuddu ay xoog ku qabsadeen. Dhulka Alle ayaa leh, waxaana xaq u leh inuu ku noolaado muslim mu'min ah, waana inay ku soo noqoto Qudsi gacanta muslimiinta. **[Al-Maa'idah: 18-21].**

قَالُواْ يَٰمُوسَىٰٓ إِنَّ فِيهَا قَوۡمٗا جَبَّارِينَ وَإِنَّا لَن نَّدۡخُلَهَا حَتَّىٰ يَخۡرُجُواْ مِنۡهَا فَإِن يَخۡرُجُواْ مِنۡهَا فَإِنَّا دَٰخِلُونَ ٢٢

22. Waxay dheheen muusow waxaa (dhulka) dhexdiisa ah qoom daran mana galayno intay ka baxaan xaggeeda hadday ka baxaanna waannu gali.

قَالَ رَجُلَانِ مِنَ ٱلَّذِينَ يَخَافُونَ أَنۡعَمَ ٱللَّهُ عَلَيۡهِمَا ٱدۡخُلُواْ عَلَيۡهِمُ ٱلۡبَابَ فَإِذَا دَخَلۡتُمُوهُ فَإِنَّكُمۡ غَٰلِبُونَۚ وَعَلَى ٱللَّهِ فَتَوَكَّلُوٓاْ إِن كُنتُم مُّؤۡمِنِينَ ﴿٢٣﴾

23. Waxay dheheen labo nin oo ka mid ah kuwa ka cabsada (Alle) una nicmeeyey Alle uga gala albaabka markaad gashaan idinkaa adkaane, Alle na tala saarta haddaad mu'miniin tihiin.

قَالُواْ يَٰمُوسَىٰٓ إِنَّا لَن نَّدۡخُلَهَآ أَبَدٗا مَّا دَامُواْ فِيهَا فَٱذۡهَبۡ أَنتَ وَرَبُّكَ فَقَٰتِلَآ إِنَّا هَٰهُنَا قَٰعِدُونَ ﴿٢٤﴾

24. Waxay dheheen Muusow annagu ma galaynno waligeed intay joogaan ee taga adiga iyo Allehaa oo la dagaallama annagu halkanaan fadhiyeynaaye.

قَالَ رَبِّ إِنِّي لَآ أَمۡلِكُ إِلَّا نَفۡسِي وَأَخِيۖ فَٱفۡرُقۡ بَيۡنَنَا وَبَيۡنَ ٱلۡقَوۡمِ ٱلۡفَٰسِقِينَ ﴿٢٥﴾

25. Wuxuu yidhi (Nabi) Muuse Allow ma hanto naftayda iyo walaalkay mooyee ee na kala bixi (xukun) dhexdannada iyo qoomka faasiqiinta ah (xun).

قَالَ فَإِنَّهَا مُحَرَّمَةٌ عَلَيۡهِمۡ أَرۡبَعِينَ سَنَةٗۚ يَتِيهُونَ فِي ٱلۡأَرۡضِۚ فَلَا تَأۡسَ عَلَى ٱلۡقَوۡمِ ٱلۡفَٰسِقِينَ ﴿٢٦﴾

26. (Alle) wuxuu yidhi iyadu "dhulka" waa ka xaaraan korkooda afartan sano oy ku wareeri dhulka ee haw murugoon qoomka faasiqiinta ah.

Mana habboona in fulayadii diiday inay galaan Qudsi waqtigii Nabi Muuse iyo kuwa ka liita ay xoog ku qabsadeen magaaladaas. Waxaase lagaga kicin karaa in dhab ahaan xaqa loo rumeeyo jidka Alle na dhab loogu jahaado, muslimiintuna isku mid noqdaan, iyagoo ku toosan sharciga Alle ee wanaagsan, haddii kale waxaa ku dhici muslimiinta wareerkii ku dhacay banii israa'iil, waana looga adkaan dhulka waxayna noqon kuwo ka baxay daacada iyo sharciga Alle, wax loo murugoodana noqon maayaan, sidii Alle u sheegay Nabi Muuse, waana in laga leexdo waddada yuhuud. **[Al-Maa'idah: 22-26].**

* وَٱتۡلُ عَلَيۡهِمۡ نَبَأَ ٱبۡنَيۡ ءَادَمَ بِٱلۡحَقِّ إِذۡ قَرَّبَا قُرۡبَانٗا فَتُقُبِّلَ مِنۡ أَحَدِهِمَا وَلَمۡ يُتَقَبَّلۡ مِنَ ٱلۡأٓخَرِۖ قَالَ لَأَقۡتُلَنَّكَۖ قَالَ إِنَّمَا يَتَقَبَّلُ ٱللَّهُ مِنَ ٱلۡمُتَّقِينَ ﴿٢٧﴾

27. Ku akhri korkooda warka labadii wiil ee ilmo Nabi Aadam ahayd si dhab ah, markay dhaweeyeen (sadaqaysteen) sadaqo oo laga aqbalay midkood lagana aqbalin kii kale, oo uu yidhi waan ku dili uu yidhi (kii kale) wuxuu

uun Alle ka aqbalaa kuwa dhawrsada.

28. Haddaad u soo fidiso xaggayga gacantaada inaad i disho anigu kugu fidin maayo gacantayda inaan ku dilo anigu waxaan ka cabsan ilaahay ee ah Rabbiga caalamka.

لَئِنۢ بَسَطتَ إِلَيَّ يَدَكَ لِتَقۡتُلَنِي مَآ أَنَا۠ بِبَاسِطٖ يَدِيَ إِلَيۡكَ لِأَقۡتُلَكَۖ إِنِّيٓ أَخَافُ ٱللَّهَ رَبَّ ٱلۡعَٰلَمِينَ ٢٨

29. Waxaana dooni inaad la noqoto dambigayga iyo kaagaba ood noqoto naarta ehelkeeda taasina waa abaalka daalimiinta.

إِنِّيٓ أُرِيدُ أَن تَبُوٓأَ بِإِثۡمِي وَإِثۡمِكَ فَتَكُونَ مِنۡ أَصۡحَٰبِ ٱلنَّارِۚ وَذَٰلِكَ جَزَٰٓؤُاْ ٱلظَّٰلِمِينَ ٢٩

30. Markaasay u qurxisay naftiisii dilka walaalkiis wuuna dilay wuxuuna noqday kuwa khasaaray.

فَطَوَّعَتۡ لَهُۥ نَفۡسُهُۥ قَتۡلَ أَخِيهِ فَقَتَلَهُۥ فَأَصۡبَحَ مِنَ ٱلۡخَٰسِرِينَ ٣٠

31. Wuxuuna Alle u bixiyey (muujiyey) tuke faadhi dhulka inuu tusiyo siduu u asturo maydka walaalkiis, wuxuuna yidhi shallaytee miyaan ka cajisay inaan noqdo sida tukahan oon asturo maydka walaalkay wuxuuna ahaaday mid qoomammooda.

فَبَعَثَ ٱللَّهُ غُرَابٗا يَبۡحَثُ فِي ٱلۡأَرۡضِ لِيُرِيَهُۥ كَيۡفَ يُوَٰرِي سَوۡءَةَ أَخِيهِۚ قَالَ يَٰوَيۡلَتَىٰٓ أَعَجَزۡتُ أَنۡ أَكُونَ مِثۡلَ هَٰذَا ٱلۡغُرَابِ فَأُوَٰرِيَ سَوۡءَةَ أَخِيۖ فَأَصۡبَحَ مِنَ ٱلنَّٰدِمِينَ ٣١

Aayadahani waxay ka warrami wixii dhex maray labadii wiil ee Nabi Aadam oo ahaa mid fiican iyo mid xun, kaasoo xasad iyo gardarro u dilay walaalkiis in Alle ka aqbalay sadaqadii, wuxuuna u sheegay inuusan isagu rabin inuu dilo naf xaq darro, maxaa yeelay ciddii saas fasha waa mid daalim ah oo gali naarta, markuu dilay walaalkiisna wuu khasaaray wuxuu falana wuu garan waayey intuu ka arko tuke qodi dhulka, markaasuu ku dayday si uu u asturo una qariyo maydka walaalkiis isagoo qoomammayn, kaasuna waa xasad iyo shaydaan taladii iyo dilkii xaq darro ee u horreeyey. Waxaana sugnaatay inuu naf kasta oo xaq darrro loo dilo uu qayb ku yeelan wiilkaas. Illeen isagaa jideeyey dilkee. Saas darteed waa in laga fogaado dil xaq darro illeen abaalkiisu waa naare. **[Al-Maa'idah: 27-31].**

مِنْ أَجْلِ ذَٰلِكَ كَتَبْنَا عَلَىٰ بَنِيٓ إِسْرَٰٓءِيلَ
أَنَّهُۥ مَن قَتَلَ نَفْسًۢا بِغَيْرِ نَفْسٍ أَوْ
فَسَادٍ فِى ٱلْأَرْضِ فَكَأَنَّمَا قَتَلَ ٱلنَّاسَ
جَمِيعًا وَمَنْ أَحْيَاهَا فَكَأَنَّمَآ أَحْيَا
ٱلنَّاسَ جَمِيعًا ۚ وَلَقَدْ جَآءَتْهُمْ رُسُلُنَا
بِٱلْبَيِّنَٰتِ ثُمَّ إِنَّ كَثِيرًا مِّنْهُم بَعْدَ ذَٰلِكَ
فِى ٱلْأَرْضِ لَمُسْرِفُونَ ﴿٣٢﴾

32. Saas darteed yaan ugu jidaynay banii'israa'iil ciddii disha naf aan (dilin) naf ama fasaadin dhulka waxay la mid tahay inuu dilay dadka dhammaan, ciddii noolaysa nafna (korisa) waxay la mid tahay isagoo nooleeyey dadkoo dhan, waxay ula timid rasuulladannadii xujooyin, markaas in badan oo ka mida intaas ka dib dhulkay ku xadgudbeen.

إِنَّمَا جَزَٰٓؤُا۟ ٱلَّذِينَ يُحَارِبُونَ ٱللَّهَ
وَرَسُولَهُۥ وَيَسْعَوْنَ فِى ٱلْأَرْضِ فَسَادًا
أَن يُقَتَّلُوٓا۟ أَوْ يُصَلَّبُوٓا۟ أَوْ تُقَطَّعَ أَيْدِيهِمْ
وَأَرْجُلُهُم مِّنْ خِلَٰفٍ أَوْ يُنفَوْا۟ مِنَ
ٱلْأَرْضِ ۚ ذَٰلِكَ لَهُمْ خِزْىٌ فِى ٱلدُّنْيَا ۖ وَلَهُمْ
فِى ٱلْءَاخِرَةِ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿٣٣﴾

33. Abaalka kuwa la dagaallama Alle iyo rasuulkiisa oo la socda dhulka fasaad waa in la dilo ama la wadho, ama loo gooyo gacmahooda iyo lugahooda isdhaaf, ama laga fogeeyo dhulka, arrintoodaasna waa inay mudan yihiin dulli adduun iyo aakhiro oo cadaab wayna.

إِلَّا ٱلَّذِينَ تَابُوا۟ مِن قَبْلِ أَن تَقْدِرُوا۟
عَلَيْهِمْ ۖ فَٱعْلَمُوٓا۟ أَنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٣٤﴾

34. Kuwa toobad keena qabasho ka hor mooyee ogaadana in Alle dambi dhaafo oo naxariisto.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَٱبْتَغُوٓا۟
إِلَيْهِ ٱلْوَسِيلَةَ وَجَٰهِدُوا۟ فِى سَبِيلِهِۦ
لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿٣٥﴾

35. Kuwa (xaqa) rumeeyow ka dhawrsada Alle una doona xaggiisa dhawaansho kuna jahaada jidkiisa waxaad u dhawdihiin inaad liibaantaane.

Alle ma jecla xumaanta iyo fasaadka ee wuxuu jecel yahay wanaagga iyo khayrka, saasuuna u dhawray nafta dadka oo ciddii u disha naf xaq darro waxay la mid tahay mid dadkoo dhan dishay, tii noolaysa oo korisana waxay la mid tahay mid dadkoo dhan noolaysay, saasaana loo ciqaabi ciddii diinta Alle iyo Nabiga la dagaallanta, oo dhulka fasaadisa, waana in la laayo ama gacnaha

iyo lugaha is dhaaf loo gooyo, ama la wadho, ama dhulka laga eryo iyagoo dulloobay aakhiro iyo adduunba, ciddiise intaan la qabannin toobad keenta Alle wuu u dhaafi. Tan kale waa in Ilaahay loogu dhawaado camal fiican iyo wanaag. Sida salaadda, zakada, soonka, xajka, jahaadka, sadaqada, wax barashada iyo baridda. Ibnu Cabbas wuxuu yidhi: wasiiladu waa dhawaansho, Qataadana wuxuu yidhi: ugu dhawaada Alle daacadiisa iyo wuxuu jecel yahay. Waxaana xadiith ku sugnaaday inay tahay darajo jannada dhexdeeda ah oo la siiyo cid Alle jecel yahay sida Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee). **[Al-Maa'idah: 32-35].**

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لَوۡ أَنَّ لَهُم مَّا فِي ٱلۡأَرۡضِ جَمِيعٗا وَمِثۡلَهُۥ مَعَهُۥ لِيَفۡتَدُواْ بِهِۦ مِنۡ عَذَابِ يَوۡمِ ٱلۡقِيَٰمَةِ مَا تُقُبِّلَ مِنۡهُمۡۖ وَلَهُمۡ عَذَابٌ أَلِيمٞ ٣٦

36. Kuwa gaaloobay hadduu u ahaado waxa dhulka ku sugan oo dhan iyo wax la mid ah inay iskaga furtaan cadaabka maalinta qiyaame lagama aqbaleen waxayna mudan cadaab daran.

يُرِيدُونَ أَن يَخۡرُجُواْ مِنَ ٱلنَّارِ وَمَا هُم بِخَٰرِجِينَ مِنۡهَاۖ وَلَهُمۡ عَذَابٞ مُّقِيمٞ ٣٧

37. Waxay dooni inay ka soo baxaan naarta kamana baxaan xaggeeda waxayna mudan cadaab joogta ah.

وَٱلسَّارِقُ وَٱلسَّارِقَةُ فَٱقۡطَعُوٓاْ أَيۡدِيَهُمَا جَزَآءَۢ بِمَا كَسَبَا نَكَٰلٗا مِّنَ ٱللَّهِۗ وَٱللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٞ ٣٨

38. Tuugga iyo tuugadda gooya gacmahooda abaalmarin waxay kasbadeen darteed waana xanuujin Alle. Ilaahayna waa adkaade falsan.

فَمَن تَابَ مِنۢ بَعۡدِ ظُلۡمِهِۦ وَأَصۡلَحَ فَإِنَّ ٱللَّهَ يَتُوبُ عَلَيۡهِۚ إِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٞ رَّحِيمٌ ٣٩

39. Ciddiise toobad keenta dulmigiisa ka dib oo fiicnaada Ilaahay wuu ka toobad aqbali, Alle na waa dambi dhaafe naxariista.

أَلَمۡ تَعۡلَمۡ أَنَّ ٱللَّهَ لَهُۥ مُلۡكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ يُعَذِّبُ مَن يَشَآءُ وَيَغۡفِرُ لِمَن يَشَآءُۗ وَٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَيۡءٖ قَدِيرٞ ٤٠

40. Miyaadan ogayn inuu Alle u sugnaaday xukunka samooyinka iyo dhulka uuna cadaabi cidduu doono, waana u dambi dhaafi cidduu la doono, Ilaahayna wax kasta wuu karaa.

Cadaabka aakharo iyo ciqaabteeda wax kasta oo adduunka jooga iyo wax la mid ahba waa layskaga furan lahaa, lamase aqbalo, gaalana lagama bixiyo naarta, waxayna mudan cadaab joogta ah. Aayadaha kale waxay ka warrami farina in tuugga la gooyo gacanta rag iyo haweenba, maxaa yeelay waa arrin xun oo diinta, caqliga, iyo abuuridda fiicanba ay diidi, sidee ruux caqli leh u gali guryo dad ama u jabsan, ama xoolahooda u kaxaysan si qarsoodi ah isagoon ka yaabayn Alle, dhawrayna akhlaaqda, ilaalinayna xaqa walaalkiisa ku dhibtamay xasilinta xoolahaa, kaas abaalkiisu waa in laga fogeeyo gacanta xun oo bukta, kuwase doqommada ah een wax kasayn ee wax ka sheegi ciqaabta tuugga, may u naxariistaan miskiinka la xaday dhididkiisii intay u naxariisan tuug, mise iyagaa tuuga ah, maxaase laga faa'iiday markii laga tagay arrintaas sow cid walba kuma seexato cabsi kumana soo toosto cabsi, immisaase tuugo dhacda habeen iyo dharaar, dadna lagu dilaa, ood maqashaa dhibaato aan laga sheekayn karin, ma saasaa roon mise in la qabto tuugga gacantiisa oo la edbiyo, oo dadka iyo xoolohiisu nabadgalyo ku noolaadaan, gaaladuse ma Alle ayay uga naxariis badan yihiin khalqigiisa, ha abuurteen iyagu tuugo ayna gooynayn, oo haw sameeyeen cir iyo dhul iyo waddan ay dagaan, hana ka bexeen wadanka iyo dhulka Alle, illeen tuugo iyo tuug ma rabee.

Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeele) wuxuu yidhi: Alle ha lacnado tuug wuxuu xadaa ukun oo la goyn gacantiisa, oos xadi xadhig oo la goyn. Taasina waxay ku tusin naf xumida tuugga iyo kan daba joogaba, naxariisina ma aha in ruux buka lagu sii daayo dadka ee waxaa naxariis ah in la daweeyo khayrkana la tusiyo wanaaggana lagu hanuuniyo shaqana loo yeelo hadday baahi jirto, waxaannu rumaysannahay Allaha falka san iyo xukunkiisa caadilka ah, ee ha u soo noqdeen kuwaas qalbiga ka buka ee tuugada ayidi. **[Al-Maa'idah: 36-40].**

* يَـٰٓأَيُّهَا ٱلرَّسُولُ لَا يَحۡزُنكَ ٱلَّذِينَ يُسَٰرِعُونَ فِي ٱلۡكُفۡرِ مِنَ ٱلَّذِينَ قَالُوٓاْ ءَامَنَّا بِأَفۡوَٰهِهِمۡ وَلَمۡ تُؤۡمِن قُلُوبُهُمۡۛ وَمِنَ ٱلَّذِينَ هَادُواْۛ سَمَّٰعُونَ لِلۡكَذِبِ سَمَّٰعُونَ لِقَوۡمٍ ءَاخَرِينَ لَمۡ يَأۡتُوكَۖ يُحَرِّفُونَ ٱلۡكَلِمَ مِنۢ بَعۡدِ مَوَاضِعِهِۦۖ يَقُولُونَ إِنۡ أُوتِيتُمۡ هَٰذَا فَخُذُوهُ وَإِن لَّمۡ تُؤۡتَوۡهُ فَٱحۡذَرُواْۚ وَمَن يُرِدِ ٱللَّهُ فِتۡنَتَهُۥ فَلَن تَمۡلِكَ لَهُۥ مِنَ ٱللَّهِ شَيۡـٔٗاۚ

41. Rasuulow yeyna ku walbahaarin kuwa ku dag dagi gaalnimada oo ah kuwa ku yidhi afkooda waan rumaynay ooyna rumayn quluubtoodu, iyo kuwa yuhuudoobay waxay maqli ogyihiin beenta waxayna maqli ogyihiin qoom kale oon kuu imaannin waxayna ka leexiyaan kalimooyinka meelaheeda (dhabta) waxayna odhan haddii laydin siiyo kan (leexsan) qaata haddaanse laydin siinnin ka

digtoonaada, ruuxuu doono Alle ibtilayntiisa waxba ugama hanatid Alle, kuwaasina waa kuwaan Alle la doonin inuu daahiriyo quluubtooda, waxayna mudan adduunka dulli aakharana waxay mudan cadaab wayn.

أُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ لَمْ يُرِدِ ٱللَّهُ أَن يُطَهِّرَ قُلُوبَهُمْ ۚ لَهُمْ فِى ٱلدُّنْيَا خِزْىٌ ۖ وَلَهُمْ فِى ٱلْءَاخِرَةِ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿٤١﴾

42. Waxay maqli ogyihiin beenta waxayna cunid badan yihiin xaaraanta, hadday kuu yimaaddaanna kala xukun dhexdooda ama ka jeedso haddaad ka jeedsatana wax kaama dhibaan haddaad kala xukuntana caddaalad ku kala xukun. Alle wuxuu jecel yahay caadiliintee.

سَمَّٰعُونَ لِلْكَذِبِ أَكَّٰلُونَ لِلسُّحْتِ ۚ فَإِن جَآءُوكَ فَٱحْكُم بَيْنَهُمْ أَوْ أَعْرِضْ عَنْهُمْ ۖ وَإِن تُعْرِضْ عَنْهُمْ فَلَن يَضُرُّوكَ شَيْـًٔا ۖ وَإِنْ حَكَمْتَ فَٱحْكُم بَيْنَهُم بِٱلْقِسْطِ ۖ إِنَّ ٱللَّهَ يُحِبُّ ٱلْمُقْسِطِينَ ﴿٤٢﴾

43. Siday kuugu xukuntami iyadoo uu agtooda yahay tawreed oo xukunkii Alle ku yaal markaasna ay ka jeedsan intaas ka dib. Kuwaasi ma aha mu'miniin.

وَكَيْفَ يُحَكِّمُونَكَ وَعِندَهُمُ ٱلتَّوْرَىٰةُ فِيهَا حُكْمُ ٱللَّهِ ثُمَّ يَتَوَلَّوْنَ مِنۢ بَعْدِ ذَٰلِكَ ۚ وَمَآ أُوْلَٰٓئِكَ بِٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٤٣﴾

Aayadahanu waxay ku soo degeen kuwa ku dagdaga gaalnimada oo ka baxa daacadda Alle iyo Rasuulkiisa, oo ka hormariya hawadooda iyo ra'yigooda shareecadda Alle, waana munaafiqiinta colka Alle ah, waxaa kale oo iyana colka Alle ah, kuwa yuhuudda ah ee beenta maqla dhexdoodana wax isu sheega, xaqana leexiya, siday u leexiyeen, ee qalloocana isfara inay haystaan, wax kalana ayan maqlin, waana kuwa Alle ibtileeyey, wax xagga Alle wax uga tarina ma jiraan, dulli iyo cadaabayna mudan aakharo iyo adduunba, been maqalkana waxay ku darsadeen cunidda xaaraanta iyo boolida, wuxuuna u khiyaar galiyey inuu iskaga jeedsado hadday u yimaaddaan ama caddaalad ku kala xukumo, xaqa oo la qariyo, beentoo la faafiyo oo la maqlo iyo xaaraanta oo la cuno waa caadada yuhuudda iyo inta raacda ama la mid noqda gaar ahaan waxay ku soo degeen xaalka zinada iyo magdhawga dilka, oy ka been sheegeen, waxaase waajiba in laga leexdo jidkooda. **[Al-Maa'idah: 41-43].**

إِنَّآ أَنزَلۡنَا ٱلتَّوۡرَىٰةَ فِيهَا هُدٗى وَنُورٞۚ يَحۡكُمُ بِهَا ٱلنَّبِيُّونَ ٱلَّذِينَ أَسۡلَمُواْ لِلَّذِينَ هَادُواْ وَٱلرَّبَّٰنِيُّونَ وَٱلۡأَحۡبَارُ بِمَا ٱسۡتُحۡفِظُواْ مِن كِتَٰبِ ٱللَّهِ وَكَانُواْ عَلَيۡهِ شُهَدَآءَۚ فَلَا تَخۡشَوُاْ ٱلنَّاسَ وَٱخۡشَوۡنِ وَلَا تَشۡتَرُواْ بِـَٔايَٰتِي ثَمَنٗا قَلِيلٗاۚ وَمَن لَّمۡ يَحۡكُم بِمَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ فَأُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلۡكَٰفِرُونَ ٤٤

44. Annagaa soo dejinnay tawreed oo uu dhexdeeda ku sugan yahay hanuun iyo nuur, oyna ku xukumayeen Nabiyadii u hoggaansamay Alle kuwii yuhuudoobay, waxaana xukumi jiray madaxdii iyo culimadii wixii laga doonay inay ilaaliyaan oo kitaabka Alle ah, waxay ku ahaayeen markhaati ee ha ka cabsanina dadka ee iga cabsada ani, hana ku gadannina aayaadkayga lacag (qiimo) yar, ciddaan xukumin wuxuu soo dejiyey Alle kuwaasi iyaga uun ayaa gaalo ah.

وَكَتَبۡنَا عَلَيۡهِمۡ فِيهَآ أَنَّ ٱلنَّفۡسَ بِٱلنَّفۡسِ وَٱلۡعَيۡنَ بِٱلۡعَيۡنِ وَٱلۡأَنفَ بِٱلۡأَنفِ وَٱلۡأُذُنَ بِٱلۡأُذُنِ وَٱلسِّنَّ بِٱلسِّنِّ وَٱلۡجُرُوحَ قِصَاصٞۚ فَمَن تَصَدَّقَ بِهِۦ فَهُوَ كَفَّارَةٞ لَّهُۥۚ وَمَن لَّمۡ يَحۡكُم بِمَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ فَأُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلظَّٰلِمُونَ ٤٥

45. Waxaan ku faral yeelnay korkooda in nafta (loo qisaaso) nafta, ishana isha, sankana sanka, dhagtana dhagta, iliggana iligga, nabarradana waa laysu qisaasi, ciddii iska sadaqaysata (saamaxda) waxay u noqon kafaaro (dambi dhaaf) ciddaanse xukmin wuxuu soo dejiyey Alle kuwaasi iyaga uun ayaa daalimiin ah.

Tawreed wuxuu ahaa kitaab Alle oo xaq ah oos Nabi Muuse ku soo dejiyey, ka dibse yuhuuddu leexisay waxaana ku yiil hanuun iyo nuur, waxaana xukumi jiray Nabiyadii Alle u hoggaansamay iyo culimadii iyo madaxdii wax kasaysay, waxaana la faray inay dhawraan maragna ka ahaadaan, oyna ku gadannin aayaadka Alle wax nacfi ah, ciddaan xukumin waxa Alle soo dejiyeyna waa mid gaaloobay. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: ciddii diida waxa Alle soo dejiyey wuu gaaloobay. Aayadda kalana waxay ka warrami qisaasta iyo in cid walba laga gudan waxay gaysato, ama naf ama xubin, taasina waxay ku tusin caddaaladda islaamka iyo in sharciga Alle u siman yahay dadku, ciddii iyadu iska cafida xaqbay u leedahay ajirna way ka heli, ciddaan saas xukuminna

waa mid daalimiin ah. Aayadduna waa arrin guud oo cid walba ku rumoobi, waxayna caddayn in dadka rag iyo haween lagu qisaasi, waxaana sugnaaday in ragga haweenka loo qisaasi. Waana taa caddaaladda islaamka ciddii ku dhaqmi. **[Al-Maa'idah: 44-45].**

وَقَفَّيْنَا عَلَىٰٓ ءَاثَٰرِهِم بِعِيسَى ٱبْنِ مَرْيَمَ مُصَدِّقًا لِّمَا بَيْنَ يَدَيْهِ مِنَ ٱلتَّوْرَىٰةِ ۖ وَءَاتَيْنَٰهُ ٱلْإِنجِيلَ فِيهِ هُدًى وَنُورٌ وَمُصَدِّقًا لِّمَا بَيْنَ يَدَيْهِ مِنَ ٱلتَّوْرَىٰةِ وَهُدًى وَمَوْعِظَةً لِّلْمُتَّقِينَ ﴿٤٦﴾

46. Waxaanna raacsiinnay raadkoodii Ciise ibnu Maryama isagoo rumayn, wixii hortiisa ahaa oo tawreeda, waxaanna siinnay injiil oo hanuun iyo nuur ku sugan yahay, una rumayn wixii ka horreeyey oo tawreeda hanuun iyo waanana u ah kuwa dhawrsada.

وَلْيَحْكُمْ أَهْلُ ٱلْإِنجِيلِ بِمَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ فِيهِ ۚ وَمَن لَّمْ يَحْكُم بِمَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْفَٰسِقُونَ ﴿٤٧﴾

47. Ha xukumeen ehelka injiil wuxuu ku soo dejiyey Alle dhexdiisa, ciddaan xukumin wuxuu soo dejiyey Alle iyaga uun ayaa faasiqiin ah.

وَأَنزَلْنَآ إِلَيْكَ ٱلْكِتَٰبَ بِٱلْحَقِّ مُصَدِّقًا لِّمَا بَيْنَ يَدَيْهِ مِنَ ٱلْكِتَٰبِ وَمُهَيْمِنًا عَلَيْهِ ۖ فَٱحْكُم بَيْنَهُم بِمَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ ۖ وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَآءَهُمْ عَمَّا جَآءَكَ مِنَ ٱلْحَقِّ ۚ لِكُلٍّ جَعَلْنَا مِنكُمْ شِرْعَةً وَمِنْهَاجًا ۚ وَلَوْ شَآءَ ٱللَّهُ لَجَعَلَكُمْ أُمَّةً وَٰحِدَةً وَلَٰكِن لِّيَبْلُوَكُمْ فِى مَآ ءَاتَىٰكُمْ ۖ فَٱسْتَبِقُوا۟ ٱلْخَيْرَٰتِ ۚ إِلَى ٱللَّهِ مَرْجِعُكُمْ جَمِيعًا فَيُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمْ فِيهِ تَخْتَلِفُونَ ﴿٤٨﴾

48. Waxaanna kugu soo dejinnay kitaabka xaqa isagoo rumayn wixii ka horreeyey oo kitaab ah, isagoo marag iyo ilaaliye u ah, ee ku kala xukun dhexdooda wuxuu soo dejiyey Alle, hana ka raacin hawadooda waxa kuu yimid oo xaq ah, dhammaan waxaan u yeellay shareeco iyo waddo, hadduu doono Alle na wuxuu idinka yeeli ummad kaliya, laakiin wuu idinku imtixaami wuxuu idin siiyey ee u tartama khayrka, xagga Alle yey noqoshadiinnu tahay dhammaan wuxuuna idiinka warrami waxaad isku diiddanaydeen.

Waxaa ka dambeeyey tawreed Nabi Ciise oo injiil lagu soo dejiyey isagoo hanuun ah u rumaynna tawreed, waxaana la faray injiil ehelkeedii inay xukumaan waxa Alle soo dejiyey illeen cidaan xukumin waxa Alle soo dejiyey waa uun faasiqe. Markaasaa quraanka sharafta leh Alle ku soo dejiyey Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) isagoo marag iyo ilaaliye u ah kutubtii hore, waana in lagu dhaqmo, oon hawada laga doorannin, ummad kasta wuuxuu Alle u yeelay sharci iyo waddo, hadduu doonana wuxuu ka yeeli lahaa ummad qudha, laakiin inuu ku imtixaamo wuxuu siiyey, waana in wanaagga loo tartamo illeen Alle ayaa loo noqone. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: annagu haddaan nahay Nabiyada waxaan nahay walaalo kala hooya ah (sharciga lagu dhaqmi waa kala duwan yahay) diintannaduna waa mid. **[Al-Maa'idah: 46-48].**

وَأَنِ ٱحۡكُم بَيۡنَهُم بِمَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ وَلَا تَتَّبِعۡ أَهۡوَآءَهُمۡ وَٱحۡذَرۡهُمۡ أَن يَفۡتِنُوكَ عَنۢ بَعۡضِ مَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ إِلَيۡكَۖ فَإِن تَوَلَّوۡاْ فَٱعۡلَمۡ أَنَّمَا يُرِيدُ ٱللَّهُ أَن يُصِيبَهُم بِبَعۡضِ ذُنُوبِهِمۡۗ وَإِنَّ كَثِيرٗا مِّنَ ٱلنَّاسِ لَفَٰسِقُونَ ٤٩

49. Ku kala xukun dhexdooda wuxuu soo dejiyey Alle, hana raacin hawadooda, kana digtoonow inay kaa fidmeeyaan waxa Alle kugu soo dejiyey qaarkiis, hadday jeedsadaanna ogow in Alle la doonayo inuu ku asiibo (ciqaabo) dambigooda qaarkiis, wax badan oo dadka ka mid ahna waa faasiqiin.

أَفَحُكۡمَ ٱلۡجَٰهِلِيَّةِ يَبۡغُونَۚ وَمَنۡ أَحۡسَنُ مِنَ ٱللَّهِ حُكۡمٗا لِّقَوۡمٖ يُوقِنُونَ ٥٠

50. Ma xukunka jaahilayad yey doonayaan, yaa uga fiican Alle xukunkiisa qoomka wax yaqiinsan (rumaysan).

Wuxuu Alle faray Nabiga ummaddiisuna waa la mide inuu ku kala xukumo dadka quraanka Alle soo dejiyey, uusanna raacin waxay gaaladu jeceshahay, kana digtoonaado inay ka leexiyaan xaqa, hadday xaqa ka jeedsanna waxaa u sabab ah dambigooda oo Alle u qabtay dadka wax badan oo ka mid ahna waa faasiqiin, mana habboona in xukun jaahili ah laga doorto xukunka iyo sharciga Alle ee wanaagsan.

Xasan Basrina wuxuu yidhi: ciddii xukunta xukunka Alle waxaan ahayn, waa xukun jaahili ah. Waa na kaas sharciga Alle iyo diintiisii waxaana dhab ah ciddii ku dhaqantana inay heli nabadgalyo, caddaalad, barwaaqo iyo wanaag, tii ka leexatana ay la kulmi halaag, qas, caddaalad darro, khilaaf, nabadgalyo la'aan iyo dhib oo dhan, sida muuqata, waxaase lala hadli ciddi caqli leh. **[Al-Maa'idah: 49-50].**

51. Kuwa xaqa rumeeyow ha ka yeelannina yuhuud iyo nasaara sokeeye, qaarkood waa sokeeyaha qaarka (kale) ciddii iyaga sokeeya ka yeelata oo idinka mid ah wuxuu ka mid yahay iyaga, Alle ma hanuuniyo qoomka daalimiinta ah.

* يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تَتَّخِذُواْ ٱلْيَهُودَ وَٱلنَّصَـٰرَىٰٓ أَوْلِيَآءَ ۘ بَعْضُهُمْ أَوْلِيَآءُ بَعْضٍ ۚ وَمَن يَتَوَلَّهُم مِّنكُمْ فَإِنَّهُۥ مِنْهُمْ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلظَّـٰلِمِينَ ﴿٥١﴾

52. Waxaad arkaysaan kuwa qalbiga ka buka (munaafiqiinta) oo u degdagi dhexdooda, iyagoo dhihi waxaannu ka cabsan inay nagu dhacdo dhibaato (socota) waxay u dhawdahay in Alle keeno fatxi (gargaar) xaggiisa ah oo markaas ay ahaadaan kuwo waxay ku qarsanayeen naftooda (oo gaal jacayl ah) qoomameeya.

فَتَرَى ٱلَّذِينَ فِى قُلُوبِهِم مَّرَضٌ يُسَـٰرِعُونَ فِيهِمْ يَقُولُونَ نَخْشَىٰٓ أَن تُصِيبَنَا دَآئِرَةٌ ۚ فَعَسَى ٱللَّهُ أَن يَأْتِىَ بِٱلْفَتْحِ أَوْ أَمْرٍ مِّنْ عِندِهِۦ فَيُصْبِحُواْ عَلَىٰ مَآ أَسَرُّواْ فِىٓ أَنفُسِهِمْ نَـٰدِمِينَ ﴿٥٢﴾

53. Waxay odhan kuwii rumeeyey (xaqa) ma kuwaasaa kuwii ku dhaartay Alle dhaar adag inay idinla jiraan, waxaa hoobtay camalkoodii waxayna ahaadeen kuwo khasaaray.

وَيَقُولُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ أَهَـٰٓؤُلَآءِ ٱلَّذِينَ أَقْسَمُواْ بِٱللَّهِ جَهْدَ أَيْمَـٰنِهِمْ ۙ إِنَّهُمْ لَمَعَكُمْ ۚ حَبِطَتْ أَعْمَـٰلُهُمْ فَأَصْبَحُواْ خَـٰسِرِينَ ﴿٥٣﴾

Wuxuu Alle sarreeye ka reebayaa kuwa xaqa rumeeyey inay sokeeye ka yeeshaan yuhuud iyo nasaara ee ah col islaamka iyo dadkiisa, illeen qaarkood qaarka kale sokeeyuu u yahaye, ciddii xadhiidh sokeeye la yeelatana iyaguu ka mid yahay, Alle na ma hanuuniyo qoom daalimiina, waxaana jira in kuwa munaafiqiinta ah ee qalbiga ka buka u degdagaan xidhiidhintooda iyagoo sheegi inay ka cabsan in dhib ku dhaco, waxayse u dhawdahay in gargaarka Alle yimaado oo markaas qoomameeyaan xumaantay qarsanayeen, waxayna odhan kuwa xaqa rumeeyey: ma kuwaasaa kuwii dhaarta adag Alle ku dhaartay inay idinla jiraan, camalkoodu wuu buray wayna khasaareen.

Aayaduhuna waxay wareemi kuwaan noolaan karin xidhiidh gaalo la'aanteed, waana doqonnimo inaad colkaa saaxiib ka dhigato, yaase wax maqashiin dadka dhumay. **[Al-Maa'idah: 51-53].**

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ مَن يَرْتَدَّ مِنكُمْ عَن دِينِهِۦ فَسَوْفَ يَأْتِى ٱللَّهُ بِقَوْمٍ يُحِبُّهُمْ وَيُحِبُّونَهُۥٓ أَذِلَّةٍ عَلَى ٱلْمُؤْمِنِينَ أَعِزَّةٍ عَلَى ٱلْكَـٰفِرِينَ يُجَـٰهِدُونَ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ وَلَا يَخَافُونَ لَوْمَةَ لَآئِمٍ ۚ ذَٰلِكَ فَضْلُ ٱللَّهِ يُؤْتِيهِ مَن يَشَآءُ ۚ وَٱللَّهُ وَٰسِعٌ عَلِيمٌ ﴿٥٤﴾

54. Kuwa xaqa rumeeyow ruuxii ka riddooba diintiisa oo idinka mid ah, wuxuu Alle keeni qoom uu jecel yahay iyana jecel, una naxariista mu'miniinta, kuna daran gaalada, kuna jahaadi jidka Alle oon ka cabsanayn canaanta canaante, taasina waa fadliga Alle wuxuuna siiyaa cidduu doono, Alle na waa deeq badane og.

إِنَّمَا وَلِيُّكُمُ ٱللَّهُ وَرَسُولُهُۥ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ٱلَّذِينَ يُقِيمُونَ ٱلصَّلَوٰةَ وَيُؤْتُونَ ٱلزَّكَوٰةَ وَهُمْ رَٰكِعُونَ ﴿٥٥﴾

55. Waligiinnu waa uun Alle iyo Rasuulkiisa iyo kuwa rumeeyey (xaqa) ee ooga salaadda oo bixiya zakada oo rukuuca.

وَمَن يَتَوَلَّ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ فَإِنَّ حِزْبَ ٱللَّهِ هُمُ ٱلْغَـٰلِبُونَ ﴿٥٦﴾

56. Ciddii ka wali yeelata Alle iyo Rasuulkiisa iyo kuwa rumeeyey xaqa xisbiga Ilaahay umbaa adkaan.

Ilaahay wuxuu inoo sheegi ciddii ka jeedsata gargaarka diintiisa iyo fulinta sharcigiisa inuu Alle ku baddali mid ka khayr roon, kana xoog badan kana toosan, oo ku jahaadi jidka Alle, kana cabsanayn dagaalid, illeen Alle ayaa fadligiisu waasac yahay, mu'miniintana Alle ayaa u wali ah, iyo rasuulkiisa iyo kuwa xaqa rumeeyey, ee tukada, zakadana bixiya, ciddii ka wali yeelata Ilaahay, Rasuulkiisa iyo kuwa xaqa rumeeyeyna wuu guulaysan, illeen xisbiga Alle umbaa adkaadee, aayaduhuna waxay ishaari in ciddii gaalawda Alle ka kaaftoomi, kuna baddali mid ka fiican, tan kale waa inaan xaqa looga leexan loogana aamusin dagaalidda. Imaam Axmed wuxuu wariyey in Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) yidhi: yuuna ka reebin midkiin cabsida dadka inuu xaqa sheego, illeen ma soo dhaweeyo ajal, mana fogeeyo risqi in xaqa la sheego, ama loo sheegi mid wayn. **[Al-Maa'idah: 54-56]**

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تَتَّخِذُوا۟ ٱلَّذِينَ ٱتَّخَذُوا۟ دِينَكُمْ هُزُوًا وَلَعِبًا مِّنَ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْكِتَـٰبَ مِن قَبْلِكُمْ وَٱلْكُفَّارَ

57. Kuwa xaqa rumeeyow sokeeye ha ka yeelannina kuwa ka yeeshay diinta jees jees iyo ciyaar oo ah kuwa ehelu kitaabka ah idinkana horreeyey iyo gaalada, kana

dhawrasada Alle haddaad tihiin mu'miniin.

أَوْلِيَآءَ ۚ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ﴿٥٧﴾

58. Markaad ugu dhawaaqdaan salaaddana waxay ka yeeshaan jees jees iyo ciyaar, waxaana arrintaas ugu wacan inay yihiin qoomaan wax kasayn.

وَإِذَا نَادَيْتُمْ إِلَى ٱلصَّلَوٰةِ ٱتَّخَذُوهَا هُزُوًا وَلَعِبًا ۚ ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ قَوْمٌ لَّا يَعْقِلُونَ ﴿٥٨﴾

59. Waxaad dhahdaa ehelu kitaabow miyaad noogu cadhoonaysaan inaan rumaynay Alle iyo waxa naloo soo dejiyey iyo wixii la dajiyey horay mooyee, iyo in badankiinnu faasiqiin yihiin mooyee.

قُلْ يَٰٓأَهْلَ ٱلْكِتَٰبِ هَلْ تَنقِمُونَ مِنَّآ إِلَّآ أَنْ ءَامَنَّا بِٱللَّهِ وَمَآ أُنزِلَ إِلَيْنَا وَمَآ أُنزِلَ مِن قَبْلُ وَأَنَّ أَكْثَرَكُمْ فَٰسِقُونَ ﴿٥٩﴾

60. Waxaad dhahdaa maydinka warramaa waxa ka shar badan arrintaas abaal marinta Alle agtiisa waa mid Alle nacladay una cadhooday kana yeelay daanyeerro, doofaarro iyo kuwa shaydaan caabuda, kuwaasay shar badan tahay meeshoodu kana dhumid badan jidka toosan.

قُلْ هَلْ أُنَبِّئُكُم بِشَرٍّ مِّن ذَٰلِكَ مَثُوبَةً عِندَ ٱللَّهِ ۚ مَن لَّعَنَهُ ٱللَّهُ وَغَضِبَ عَلَيْهِ وَجَعَلَ مِنْهُمُ ٱلْقِرَدَةَ وَٱلْخَنَازِيرَ وَعَبَدَ ٱلطَّٰغُوتَ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ شَرٌّ مَّكَانًا وَأَضَلُّ عَن سَوَآءِ ٱلسَّبِيلِ ﴿٦٠﴾

Wax badan yuu quraanku ka digay sokeeye ka yeelashada gaalada ka yeelan diinta Alle jees jees iyo ciyaar, ama ha ahaado ehelu kitaab ama gaala kalee, sidoo kale waxay ku jees jeesaan aadaanka salaadda illeen waa kuwo aan wax kasayne, waxay muslimiinta ku nici oon xaqay rumeeyeen ahaynna ma jiro, waxaana u xun wax la arko cid Alle lacnaday, oo u cadhooday, oo ka yeelay daanyeer, doofaar iyo sheydaan caabud, waxaana jirta arrin dhab ah oo quraanku ku celceliyo oo ah in gaalo tahay colka Alle, Nabiga, diinta islaamka ah, muslimiinta iyo xaqa toosanba, waana in laga digtoonaado lagana feejignaado. **[Al-Maa'idah: 57-60].**

61. Hadday idiin yimaaddaan waxay dhahaan waan rumaynay (xaqa) iyagoo la soo galay gaalnimo, lana baxay, Alle na waa og yahay waxay qarin.

وَإِذَا جَآءُوكُمْ قَالُوٓا۟ ءَامَنَّا وَقَد دَّخَلُوا۟ بِٱلْكُفْرِ وَهُمْ قَدْ خَرَجُوا۟ بِهِۦ ۚ وَٱللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا كَانُوا۟ يَكْتُمُونَ ﴿٦١﴾

وَتَرَىٰ كَثِيرًا مِّنْهُمْ يُسَٰرِعُونَ فِى ٱلْإِثْمِ وَٱلْعُدْوَٰنِ وَأَكْلِهِمُ ٱلسُّحْتَ ۚ لَبِئْسَ مَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿٦٢﴾

62. Waxaad arkaysaa wax badan oo ka mid ah oo u degdegi dambiga iyo colnimada iyo cunidda xaaraanta, waxaa xumaan badan waxay fali.

لَوْلَا يَنْهَىٰهُمُ ٱلرَّبَّٰنِيُّونَ وَٱلْأَحْبَارُ عَن قَوْلِهِمُ ٱلْإِثْمَ وَأَكْلِهِمُ ٱلسُّحْتَ ۚ لَبِئْسَ مَا كَانُوا۟ يَصْنَعُونَ ﴿٦٣﴾

63. May ka reebaan ikhyaartu iyo culimadu hadalkooda dambiga ah iyo cunidda xaaraanta, waxaa xumaan badan waxay samayn.

وَقَالَتِ ٱلْيَهُودُ يَدُ ٱللَّهِ مَغْلُولَةٌ ۚ غُلَّتْ أَيْدِيهِمْ وَلُعِنُوا۟ بِمَا قَالُوا۟ ۘ بَلْ يَدَاهُ مَبْسُوطَتَانِ يُنفِقُ كَيْفَ يَشَآءُ ۚ وَلَيَزِيدَنَّ كَثِيرًا مِّنْهُم مَّآ أُنزِلَ إِلَيْكَ مِن رَّبِّكَ طُغْيَٰنًا وَكُفْرًا ۚ وَأَلْقَيْنَا بَيْنَهُمُ ٱلْعَدَٰوَةَ وَٱلْبَغْضَآءَ إِلَىٰ يَوْمِ ٱلْقِيَٰمَةِ ۚ كُلَّمَآ أَوْقَدُوا۟ نَارًا لِّلْحَرْبِ أَطْفَأَهَا ٱللَّهُ ۙ وَيَسْعَوْنَ فِى ٱلْأَرْضِ فَسَادًا ۚ وَٱللَّهُ لَا يُحِبُّ ٱلْمُفْسِدِينَ ﴿٦٤﴾

64. Waxay tidhi yuhuuddu gacanta Alle waa laaban tahay, ha la laabo gacmahoodu hana la naclado hadalkay dheheen dartiis, saas ma aha ee waxay ku fidsan yihiin khayrka (deeq badane) wuxuuna u nafaqeeyaa siduu doono, wuxuuna u kordhin wax badan oo iyaga ka mid ah waxa lagaaga soo dejiyey Allehaa xad gudub iyo gaalnimo, waxaanna ku dhex tuurnay col iyo cadho tan iyo qiyaame, mar kastooy huriyaan dab dagaalna waxaa bakhtiiya Alle, waxayna la socdaan dhulka fasaad, ilaahayna ma jecla kuwa wax fasaadiya.

Munaafiqiintu meelay joogaanba kama tagaan gaalnimo iyo xumaan, Alle na waa og yahay waxay qarin, waxaadna ku aragtaa inay u deg degi dambiga, colnimada iyo xaaraan cunka, wax xun bayna falaan, culimadaan ka reebin waxaasna waxay sameeyeen wax xumaan badan. Yuhuudna lacnadi ha ku dhacdee waxay af-xumeeyeen Ilaaheen sarreeye, kuna sheegeen bakhaylnimo, iyagaase bakhayllo ah lana lacnaday ee Alle waa deeqsi siduu rabo wax u bixiya, waxayna ka qaadi xaqa xad gudub, gaalnimo, col dhexdooda ah, cadho tan iyo

qiyaamada, dabkay huriyaanna Alle ayaa bakhtiin, dhulkana way fasaadiyaan Alle na ma jecla kuwa wax fasaadiya. **[Al-Maa'idah: 61-64].**

وَلَوْ أَنَّ أَهْلَ ٱلْكِتَٰبِ ءَامَنُوا۟ وَٱتَّقَوْا۟ لَكَفَّرْنَا عَنْهُمْ سَيِّـَٔاتِهِمْ وَلَأَدْخَلْنَٰهُمْ جَنَّٰتِ ٱلنَّعِيمِ ﴿٦٥﴾

65. Hadday ehelu kitaabku rumeeyaan xaqa oy dhawrsadaan waxaan ka asturi lahayn xaggooda xumaantooda waxaanna galin lahayn jannada naciimo.

وَلَوْ أَنَّهُمْ أَقَامُوا۟ ٱلتَّوْرَىٰةَ وَٱلْإِنجِيلَ وَمَآ أُنزِلَ إِلَيْهِم مِّن رَّبِّهِمْ لَأَكَلُوا۟ مِن فَوْقِهِمْ وَمِن تَحْتِ أَرْجُلِهِمْ ۚ مِّنْهُمْ أُمَّةٌ مُّقْتَصِدَةٌ ۖ وَكَثِيرٌ مِّنْهُمْ سَآءَ مَا يَعْمَلُونَ ﴿٦٦﴾

66. Hadday ku camal falaan tawreed, injiil, iyo waxa looga soo dejiyey xagga Rabbigoodna waxay ka cuni lahaayeen korkooda iyo hoostooda, «barwaaqo», waxaa ka mid ah ummad dhex dhexaysa wax badan oo ka mid ahna waxaa xun waxay fali.

۞ يَٰٓأَيُّهَا ٱلرَّسُولُ بَلِّغْ مَآ أُنزِلَ إِلَيْكَ مِن رَّبِّكَ ۖ وَإِن لَّمْ تَفْعَلْ فَمَا بَلَّغْتَ رِسَالَتَهُۥ ۚ وَٱللَّهُ يَعْصِمُكَ مِنَ ٱلنَّاسِ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٦٧﴾

67. Rasuulow gaadhsii waxa lagaaga soo dejiyey Allehaa (dadka) haddaadan falin maadan gaadhsiin risaaladiisa "farriintiisa", Alle ayaana kaa ilaalin dadka, Allana ma hanuuniyo qoom gaala ah.

Kutubta Alle soo dejiyey waa xaq haddaan la leexin, saas darteed hadday ku camal fali lahaayeen ehelu kitaabku waxaa la dhaafi lahaa dambigooda, waana la jannayni lahaa, waxayna heli lahaayeen barwaaqo, waxaase laga helaa cid dhex dhexaysa, wax badan baase xumaan fala, Alle na wuxuu faray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu gaadhsiiyo dadka waxa Alle ku soo dejiyey, hadduusan saas falinna wax ma gaadhsiin, dadkana Alle ayaa ka dhawri mana hanuuniyo gaalada. Caa'isha waxay tidhi: hadduu Nabigu qarin waxa loo waxyooday wuxuu qarin lahaa aayaddan. Nabiguna maalinta xajkii waynaa wuxuu warsaday asaxaabta inuu gaadhsiiyey xaqa iyo in kale waxayna sheegeen inuu gaadhsiiyey, markaasuu farta cirka u taagay oo yidhi oo ku soo cel celiyey oo yidhi: Allow sow ma gaadhsiin. **[Al-Maa'idah: 65-67].**

68. Waxaad dhahdaa ehelu kitaabow waxba ma tihidiin intaad ka oogtaan tawreed, injiil iyo waxa laydiinka soo dejiyey xagga Allihiin (quraanka) wuxuuna u kordhin wax badan oo ka mid ah waxa xagga Allehaa lagaaga soo dejiyey xad gudub iyo gaalnimo ee haw murugoon qoomka gaalada ah.

قُلْ يَٰٓأَهْلَ ٱلْكِتَٰبِ لَسْتُمْ عَلَىٰ شَىْءٍ حَتَّىٰ تُقِيمُوا۟ ٱلتَّوْرَىٰةَ وَٱلْإِنجِيلَ وَمَآ أُنزِلَ إِلَيْكُم مِّن رَّبِّكُمْ ۗ وَلَيَزِيدَنَّ كَثِيرًا مِّنْهُم مَّآ أُنزِلَ إِلَيْكَ مِن رَّبِّكَ طُغْيَٰنًا وَكُفْرًا ۖ فَلَا تَأْسَ عَلَى ٱلْقَوْمِ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٦٨﴾

69. Kuwa xaqa rumeeyey iyo kuwa yuhuudoobay iyo saabi'iinta iyo nasaara ciddii rumeysa Alle, maalinta dambe (qiyaamada) oo fala camal fiican cabsi korkooda ma ahaato iyo walbahaar (midna).

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَٱلَّذِينَ هَادُوا۟ وَٱلصَّٰبِـُٔونَ وَٱلنَّصَٰرَىٰ مَنْ ءَامَنَ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ وَعَمِلَ صَٰلِحًا فَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿٦٩﴾

70. Waxaan qaadnay ballanka banii'israa'iil waxaanna u dirnay xaggooda rasuullo, markastoo uu ula yimaaddo rasuul waxaan naftoodu jeclayn koox way beeniyaan kooxna way dilaan.

لَقَدْ أَخَذْنَا مِيثَٰقَ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ وَأَرْسَلْنَآ إِلَيْهِمْ رُسُلًا ۖ كُلَّمَا جَآءَهُمْ رَسُولٌۢ بِمَا لَا تَهْوَىٰٓ أَنفُسُهُمْ فَرِيقًا كَذَّبُوا۟ وَفَرِيقًا يَقْتُلُونَ ﴿٧٠﴾

71. Waxayna u maleeyeen inaan fidmo jirin, wayna indho beeleen oo dhago beeleen, markaasuu Alle ka toobad aqbalay, markaasay indho beeleen oo dhago beeleen wax badan oo ka mid ah, Alle na waa arkaa waxay fali.

وَحَسِبُوٓا۟ أَلَّا تَكُونَ فِتْنَةٌ فَعَمُوا۟ وَصَمُّوا۟ ثُمَّ تَابَ ٱللَّهُ عَلَيْهِمْ ثُمَّ عَمُوا۟ وَصَمُّوا۟ كَثِيرٌ مِّنْهُمْ ۚ وَٱللَّهُ بَصِيرٌۢ بِمَا يَعْمَلُونَ ﴿٧١﴾

Ehelu kitaab waxba ma aha intay kaga socdaan waxay tawreed, injiil iyo quraanka fari, wax badan oo ka mid ahna way xad gudbaan oo gaaloobaan markay quraanka maqlaan, ciddii Alle rumeysa iyo qiyaame oo camal fiican

fasha oo waafaqsan shareecada islaamka cabsi iyo murug midna ma hayso, reer banii israa'iil wuxuu Alle ballan kaga qaaday inay xaqa rumeeyaan, wayse buriyeen oo ay rasuullada qaar beeniyaan qaarna dilaan, iyagoon dhib u arkayn, waase kuwo indho iyo dhaga la' waana arkaa Alle waxay fali, aayaduhuna waxay caddayn in dadku qiimo ku leeyahay raacidda iyo ku dhaqanka xaqa, haddii kale waxba ma aha, wax qiima ahna ma laha. **[Al-Maa'idah: 68-71].**

لَقَدْ كَفَرَ ٱلَّذِينَ قَالُوٓاْ إِنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلْمَسِيحُ ٱبْنُ مَرْيَمَۖ وَقَالَ ٱلْمَسِيحُ يَٰبَنِيٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ٱعْبُدُواْ ٱللَّهَ رَبِّي وَرَبَّكُمْۖ إِنَّهُۥ مَن يُشْرِكْ بِٱللَّهِ فَقَدْ حَرَّمَ ٱللَّهُ عَلَيْهِ ٱلْجَنَّةَ وَمَأْوَىٰهُ ٱلنَّارُۖ وَمَا لِلظَّٰلِمِينَ مِنْ أَنصَارٍ ﴿٧٢﴾

72. Waxaa gaaloobay kuwa yidhi Alle waa Masiixi ibnu Maryama, wuxuuna yidhi Masiix (Ciise): banii israa'iilow caabuda Alle ee ah Rabbigay iyo Rabbigiin, ruuxii u shariig yeela Alle (oo wax la wadaajiya) wuxuu Alle ka xarrimay jannada wuxuuna ku hoyan naarta, daalimna ma helo gargaare.

لَّقَدْ كَفَرَ ٱلَّذِينَ قَالُوٓاْ إِنَّ ٱللَّهَ ثَالِثُ ثَلَٰثَةٍۘ وَمَا مِنْ إِلَٰهٍ إِلَّآ إِلَٰهٌ وَٰحِدٌۚ وَإِن لَّمْ يَنتَهُواْ عَمَّا يَقُولُونَ لَيَمَسَّنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ مِنْهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٧٣﴾

73. Waxaa gaaloobay kuwii yidhi ilaahay waa saddex midkood, macbuud xaq lugu caabudana ma lihidin oo aan macbuudka kaliga ah ahayn (waana midkaan waxna dhalin, lana dhalin), hadayna ka joogin waxay sheegina waxaa taaban kuwa gaaloobay oo ka mid ah cadaab daran.

أَفَلَا يَتُوبُونَ إِلَى ٱللَّهِ وَيَسْتَغْفِرُونَهُۥۚ وَٱللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٧٤﴾

74. Miyeyna u toobad keenayn Alle oyna dambi dhaaf warsanayn, Alle ayaana dambi dhaafe naxariista ah.

مَّا ٱلْمَسِيحُ ٱبْنُ مَرْيَمَ إِلَّا رَسُولٌ قَدْ خَلَتْ مِن قَبْلِهِ ٱلرُّسُلُ وَأُمُّهُۥ صِدِّيقَةٌۖ كَانَا يَأْكُلَانِ ٱلطَّعَامَۗ

75. Masiix (Ciise) ibnu Maryama ma aha waxaan rasuul ahayn, waxaana tagay hortiis rasuulladii. Hooyadiisna waxay ahayd rumayso, waxayna cuni

jireen cunnada, day saannu ugu caddayn aayaadka markaas day sida loo iilo.

ٱنظُرْ كَيْفَ نُبَيِّنُ لَهُمُ ٱلْآيَـٰتِ ثُمَّ ٱنظُرْ أَنَّىٰ يُؤْفَكُونَ ﴿٧٥﴾

Aayadahanu waxay caddayn siday nasaaro u gaaloowday, oo ah inay Nabi Ciise ilaah ku sheegeen, oy dheheen waa ilaah saddaxaad, isagooy dhabtu tahay inuu Allaah kali yahay wax la wadaaga ilaahnimada jirin, ciddii wax la wadaajisana janno ka dheer tahay, naarna uu gali, Nabi Ciisana yahay addoon Alle oo rasuul ah sidii rasuulladii hore, hooyadiina runlay tahay ooyna ahaayeen kuwo wax cuna, balse day sida xaqa loogu caddeeyey iyo siday u dhumi. Saas darteed yey doqonimo tahay in Alle la diido ama ilaah kale la sheego, wanaag, sharaf, iyo jannona waxaa mudan muslimka toosan siduu Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) u yidhi: ma galo jannada ruuxaan muslim ahayn. **[Al-Maa'idah: 72-75].**

قُلْ أَتَعْبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ مَا لَا يَمْلِكُ لَكُمْ ضَرًّا وَلَا نَفْعًا ۚ وَٱللَّهُ هُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْعَلِيمُ ﴿٧٦﴾

76. Waxaad dhahdaa ma waxaad caabudaysaan Alle ka sokow waxaan hanannin dhib iyo dheef (midna) Allana yahay maqle oge ah.

قُلْ يَـٰٓأَهْلَ ٱلْكِتَـٰبِ لَا تَغْلُوا۟ فِى دِينِكُمْ غَيْرَ ٱلْحَقِّ وَلَا تَتَّبِعُوٓا۟ أَهْوَآءَ قَوْمٍ قَدْ ضَلُّوا۟ مِن قَبْلُ وَأَضَلُّوا۟ كَثِيرًا وَضَلُّوا۟ عَن سَوَآءِ ٱلسَّبِيلِ ﴿٧٧﴾

77. Waxaad dhahdaa ehelu kitaabow ha ku xadgudbina diintiinna si aan xaq ahayn, hana raacina hawada qoom dhumay mar hore dhumiyeyna wax badan kana dhumay jidka toosan.

لُعِنَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مِنۢ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ عَلَىٰ لِسَانِ دَاوُۥدَ وَعِيسَى ٱبْنِ مَرْيَمَ ۚ ذَٰلِكَ بِمَا عَصَوا۟ وَّكَانُوا۟ يَعْتَدُونَ ﴿٧٨﴾

78. Waa lagu lacnaday kuwii gaaloobay oo banii israa'iil ah carrabka Daawuud iyo Ciise ibnu Maryama arrintaasna waxaa ugu wacan caasinnimadooda, ahaayeenna kuwo xadgudba.

كَانُوا۟ لَا يَتَنَاهَوْنَ عَن مُّنكَرٍ فَعَلُوهُ ۚ لَبِئْسَ مَا كَانُوا۟ يَفْعَلُونَ ﴿٧٩﴾

79. Waxayna ahaayeen kuwaan iska reebayn xumaan ay falayaan, waxaa xun waxay falayeen.

تَرَىٰ كَثِيرًا مِّنْهُمْ يَتَوَلَّوْنَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ ۚ لَبِئْسَ مَا قَدَّمَتْ لَهُمْ أَنفُسُهُمْ أَن سَخِطَ ٱللَّهُ عَلَيْهِمْ وَفِى ٱلْعَذَابِ هُمْ خَٰلِدُونَ ﴿٨٠﴾

80. Waxaad arkaysaan wax badan oo ka mid ah oo sokeeye ka dhigan kuwo gaaloobay, waxaa xun waxay u hormarsatay naftoodu oo ah in Alle u cadhooday, cadaabkana ay ku waari.

وَلَوْ كَانُوا۟ يُؤْمِنُونَ بِٱللَّهِ وَٱلنَّبِىِّ وَمَآ أُنزِلَ إِلَيْهِ مَا ٱتَّخَذُوهُمْ أَوْلِيَآءَ وَلَٰكِنَّ كَثِيرًا مِّنْهُمْ فَٰسِقُونَ ﴿٨١﴾

81. Hadday yihiin kuwo rumeyn Alle iyo Nabiga iyo waxa lagu soo dejiyey mayna ka yeesheen sokeeye gaalo laakiin wax badan oo ka mid ah waa faasiqiin.

Alle ayaa cibaado muta awoodna leh, mana habboona in wax kale la caabudo, tan kale waa inaan lagu xad-gudbin diinta si aan xaq ahayn oo cidna la siin xaqa Alle siday gaaladu faleen, kuwaasoo lagu lacnaday carrabkii Nabi Daawuud iyo Ciise ibnu Maryama, illeen xumaanta iskama reebi jirine, waxaana jira kuwo gaalada sokeeye ka dhigan, waase kuwo Alle u cadhooday oo ku waari naarta, illeen hadday Alle iyo Nabiga dhab u rumeeyaan kamayna yeesheen sokeeye, laakiin wax badan oo ka mid ah waa faasiqiin. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: fara wanaagga oo reeba xumaanta ka hor intaydaan intaad Ilaahay baridaan uusan idin ajiibin. Taasina waxay muujin in wanaagga la faro dadka xumaantana laga reebo, jidka gaaladana laga fogaado. **[Al-Maa'idah: 76-81].**

* لَتَجِدَنَّ أَشَدَّ ٱلنَّاسِ عَدَٰوَةً لِّلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ٱلْيَهُودَ وَٱلَّذِينَ أَشْرَكُوا۟ ۖ وَلَتَجِدَنَّ أَقْرَبَهُم مَّوَدَّةً لِّلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ٱلَّذِينَ قَالُوٓا۟ إِنَّا نَصَٰرَىٰ ۚ ذَٰلِكَ بِأَنَّ مِنْهُمْ قِسِّيسِينَ وَرُهْبَانًا وَأَنَّهُمْ لَا يَسْتَكْبِرُونَ ﴿٨٢﴾

82. Waxaad ogaan kuwa dadka u daran colnimada kuwa rumeeyey (xaqa) (muslimiinta) yuhuud iyo mushrikiinta (diin laawayaasha) waxaad ogaan kuwa ugu soo dhaw jacayl kuwa rumeeyey xaqa (muslimiinta) inay yihiin kuwa dhihi waxaan nahay nasaaro, illeen waxaa ka mid ah qisiisyo iyo raahibiin ismana kibriyaan.

وَإِذَا سَمِعُوا۟ مَآ أُنزِلَ إِلَى ٱلرَّسُولِ تَرَىٰٓ أَعْيُنَهُمْ تَفِيضُ مِنَ ٱلدَّمْعِ مِمَّا عَرَفُوا۟ مِنَ ٱلْحَقِّ ۖ يَقُولُونَ رَبَّنَآ ءَامَنَّا

83. Markay maqlaan waxa lagu soo dejiyey Rasuulkana waxaad arkaysaa indhahoodoo ilmo ka daadan waxay aqoonsadeen oo

xaqa ah iyagoo dhihi Allow waan rumeynay ee nagu dhig (yeel) kuwa marag furi (xaqa qiri).

فَٱكۡتُبۡنَا مَعَ ٱلشَّٰهِدِينَ ٨٣

84. Maxaannaan u rumeynaynin Alle iyo waxa noo yimid oo xaq ah oonnaan u damcaynin inuu na galiyo (naga yeelo) Rabbigeen qoomka suuban la jirkooda.

وَمَا لَنَا لَا نُؤۡمِنُ بِٱللَّهِ وَمَا جَآءَنَا مِنَ ٱلۡحَقِّ وَنَطۡمَعُ أَن يُدۡخِلَنَا رَبُّنَا مَعَ ٱلۡقَوۡمِ ٱلصَّٰلِحِينَ ٨٤

85. Wuuna ku abaal marin Alle waxay dhaheen jannooyin oy socoto dhexdeeda wabiyaal iyagoo ku waari dhexdeeda, taasina waa abaal marinta samafalayaasha.

فَأَثَٰبَهُمُ ٱللَّهُ بِمَا قَالُواْ جَنَّٰتٖ تَجۡرِي مِن تَحۡتِهَا ٱلۡأَنۡهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَاۚ وَذَٰلِكَ جَزَآءُ ٱلۡمُحۡسِنِينَ ٨٥

86. Kuwa gaaloobay oo beeniyey aayaadkannaga kuwaasu waa jaxiimo ehelkeeda.

وَٱلَّذِينَ كَفَرُواْ وَكَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِنَآ أُوْلَٰٓئِكَ أَصۡحَٰبُ ٱلۡجَحِيمِ ٨٦

Ibnu Cabaas wuxuu yidhi waxay ku soo degtey aayadahan nejaashi iyo saaxiibadiis, markuu Jacfar ku akhriyey quraanka, waxaase muuqata had iyo jeer colnimada iyo necbaanta yuhuud iyo diinlaaweyaashu u qabaan xaqa iyo diinta islaamka iyo muslimiinta, hase yeeshee hadday nasaaradu ugu dhaqmi injiil si dhab ah oo sugan waa inay noqdaan sida aayaduhu sheegeen oo ka dhawraan colka iyo waxyeellada muslimiinta iyo diinta islaamka, haddii kale kuma dhaqmaan injiil ee waa yuhuud ama mulxidiin diin-laawayaal ah, kuwaasna waxaa xaqa u diiday xasad, isla wayni, xumaan jecayl iyo inay xorriyad u helaan si ay uga dharjiyaan naftooda wax kastoo xumaana oy doonaan. Waxaana sugnaatay hadduu la kaliyoobo yuhuudi ruux muslim ah wuxuu doonaa inuu dilo. Taasina way muuqataa had iyo jeer, waase in laysku duubnaado lagana digtoonaado, lagana hor tago. **[Al-Maa'idah: 82-86]**

87. Kuwa xaqa rumeeyow ha xarrimina wanaagga (xalaasha) Alle idiin banneeyey hana xadgudbina, Alle ma jecla kuwa xad gudbee.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تُحَرِّمُواْ طَيِّبَٰتِ مَآ أَحَلَّ ٱللَّهُ لَكُمۡ وَلَا تَعۡتَدُوٓاْۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُحِبُّ ٱلۡمُعۡتَدِينَ ٨٧

وَكُلُوا۟ مِمَّا رَزَقَكُمُ ٱللَّهُ حَلَٰلًا طَيِّبًا ۖ
وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ ٱلَّذِىٓ أَنتُم بِهِۦ مُؤْمِنُونَ ﴿٨٨﴾

88. Waxna ka cuna wuxuu idinku arzaaqay Alle isagoo xalaal fiican ah kana dhawrsada Alle ee ah kaad rumeysan tihiin.

لَا يُؤَاخِذُكُمُ ٱللَّهُ بِٱللَّغْوِ فِىٓ
أَيْمَٰنِكُمْ وَلَٰكِن يُؤَاخِذُكُم بِمَا
عَقَّدتُّمُ ٱلْأَيْمَٰنَ ۖ فَكَفَّٰرَتُهُۥٓ إِطْعَامُ
عَشَرَةِ مَسَٰكِينَ مِنْ أَوْسَطِ مَا
تُطْعِمُونَ أَهْلِيكُمْ أَوْ كِسْوَتُهُمْ أَوْ
تَحْرِيرُ رَقَبَةٍ ۖ فَمَن لَّمْ يَجِدْ فَصِيَامُ ثَلَٰثَةِ
أَيَّامٍ ۚ ذَٰلِكَ كَفَّٰرَةُ أَيْمَٰنِكُمْ إِذَا حَلَفْتُمْ ۚ
وَٱحْفَظُوٓا۟ أَيْمَٰنَكُمْ ۚ كَذَٰلِكَ يُبَيِّنُ ٱللَّهُ
لَكُمْ ءَايَٰتِهِۦ لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿٨٩﴾

89. Alle idiin ma qabto dhaar dan la'aaneed (laqwi) laakiin wuxuu idiin qaban dhaartaad u qasaddaan, kafaaradeeduna waa quudin toban miskiin (oo siisaan) kan u dhexeeya waxaad ku quudisaan ehelkiinna ama arrad bixintooda ama xorayn qoor, ciddaan helinna waxay soomi saddex maalmood, taasaana ah kafaarada dhaartiinna markaad dhaarataan, ee dhawra dhaartiinna saasuuna idiinku caddayn Alle aayadkiisa, waxaadna mudan tihiin inaad ku mahdisaan.

Ma bannaana wax Alle banneeyey in la xarrimo, ama lagu xad-gudbo, illeen Alle ma jecla kuwaas xad-gudbee, waana in xalaasha fiican la cuno. Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: waxay soo degtay mar koox asaxaabtii ah ay damceen in nolosha adduunka dhan ka maraan, markaasuu Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) yidhi markii loo sheegay: anigu waan soomi (sunnaha) oon marna afuri, marna waan tukan (sunnaha) marna waan seexan, haweenkana waan guursan ee ciddii sunnadayda (waddadayda) qaadatana waa iga mid, ciddaan qaadaninna iga mid ma aha. (Ibnu abii Xaatim). Aayadda kalana waxay ka warrami inaan Alle inoo qabanayn dhaarta carrabku xado ee midda loo qasdo umbaa laysu qaban, waxaana lagu kafaara gutaa haddaan la falinnin toban miskiin quudintood ama arrad bixintood ama xorayn qoor, waase in la dhawraa dhaarta, Alle na wax walba wuu caddayn inaad ku mahdisaan. **[Al-Maa'idah: 87-89].**

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ إِنَّمَا ٱلْخَمْرُ
وَٱلْمَيْسِرُ وَٱلْأَنصَابُ وَٱلْأَزْلَٰمُ رِجْسٌ
مِّنْ عَمَلِ ٱلشَّيْطَٰنِ فَٱجْتَنِبُوهُ لَعَلَّكُمْ
تُفْلِحُونَ ﴿٩٠﴾

90. Kuwa xaqa rumeeyow khamrada, qamaarka, sanamyada «taagan», iyo faalku waa uun xumaan (wasakh) oo camal shaydaana ee ka fogaada inaad liibaantaan.

إِنَّمَا يُرِيدُ ٱلشَّيْطَٰنُ أَن يُوقِعَ بَيْنَكُمُ ٱلْعَدَٰوَةَ وَٱلْبَغْضَآءَ فِى ٱلْخَمْرِ وَٱلْمَيْسِرِ وَيَصُدَّكُمْ عَن ذِكْرِ ٱللَّهِ وَعَنِ ٱلصَّلَوٰةِ ۖ فَهَلْ أَنتُم مُّنتَهُونَ ﴿٩١﴾

91. Wuxuu uun dooni shaydaanku inuu idinku dhextuuro colnimo iyo isnac khamrada iyo qamaarka idinkana celiyo xusidda Alle iyo salaadda ee ma ka joogaysaan (ka jooga).

وَأَطِيعُوا۟ ٱللَّهَ وَأَطِيعُوا۟ ٱلرَّسُولَ وَٱحْذَرُوا۟ ۚ فَإِن تَوَلَّيْتُمْ فَٱعْلَمُوٓا۟ أَنَّمَا عَلَىٰ رَسُولِنَا ٱلْبَلَٰغُ ٱلْمُبِينُ ﴿٩٢﴾

92. Adeeca Alle, adeecana Rasuulka, digtoonaadana, haddaadse jeedstaan ogaada waxaa uun rasuulkannaga saaran gaadhsiin cad.

لَيْسَ عَلَى ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ جُنَاحٌ فِيمَا طَعِمُوٓا۟ إِذَا مَا ٱتَّقَوا۟ وَّءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ ثُمَّ ٱتَّقَوا۟ وَّءَامَنُوا۟ ثُمَّ ٱتَّقَوا۟ وَّأَحْسَنُوا۟ ۗ وَٱللَّهُ يُحِبُّ ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿٩٣﴾

93. Dhib (dambi) ma saarna kuwa xaqa rumeeyey oo camal fiican falay waxay quuteen hadday dhawrsadaan oy xaqa dhab u rumeeyaan camal fiicanna falaan, oy xumaanta ka dhawrsadaan oy xaqa rumeeyaan, haddana dhawrsadaan samana falaan, Alle na wuxuu jecel yahay samo falayaasha.

Khamrada iyo qamaarka, iyo wax u gawricidda iyo xuska sanamyada la taagay iyo faalkuba waa waxyaalo xun oo camal shaydaana, oo khayrka kaa celin, colnimo iyo cadhana beeri waana waajib inuu ruuxa muslimka ah ka fogaado isagoo Alle iyo Rasuulkiisa adeeci, ciddii xaqa ka jeedsatana waxba rasuulka kama saarna oon gaadhsiin cad ahayn, dadkiise falay wax ka mid ah waxaas intaan la xarrimin dambi ma saarra hadday dhab xaqa u rumeeyaan ka dib oo dhawrsadaan camal fiicanna falaan, illeen Alle ayaa jecel sidaase, xumaanta khamrada, qamaarka iyo waxa la midka ah wax qarsoon ma aha, waana aakharo, adduun, caafimaad, xoolo, caqli iyo sharaf waa, inta caqliga leh oo dhanna waxay ku kulmeen xumaanta iyo waxyeellada khamrada, waxaana ka warramay xaaraannimadeeda iyo waxyeelladeedaa Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) waxaana ka mida wax kastoo wax waaliya waa khamro waana xaaraan. Iyo Alle ha lacnado khamrada, kan cabba, kan waraabiya, kan gada, kan gata, kan xambaara, kan loo xambaaro, kan miira, kan loo miiro iyo kan cuna lacagteeda. Waxaa wariyey (imaam Axmed).

Bal day xaalkeeda iyo xumideeda, waa taas aragtida islaamka ee khamrada. Wuxuuna Alle banneeyey waxyaalo macaan oo fiican oo la cabbo, maxayse ka heleen kuwa banneeyey, waa uun waalli, cudur, dil, nabad-galyo darro iyo xumaan oo dhan. Illeen khamro waa hooyada xumaantee, maxaa ka fiican islaamka iyo wuxuu fari waana waajib in la raaco. **[Al-Maa'idah: 90-93].**

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَيَبْلُوَنَّكُمُ ٱللَّهُ بِشَىْءٍ مِّنَ ٱلصَّيْدِ تَنَالُهُۥٓ أَيْدِيكُمْ وَرِمَاحُكُمْ لِيَعْلَمَ ٱللَّهُ مَن يَخَافُهُۥ بِٱلْغَيْبِ ۚ فَمَنِ ٱعْتَدَىٰ بَعْدَ ذَٰلِكَ فَلَهُۥ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٩٤﴾

94. Kuwa xaqa rumeeyow wuxuu idinku imtixaami Alle wax ugaadha ka mid ah, oo gaadhaan gacmihiinnu iyo warammihiinnu in Alle ogaado cidda ka cabsata isagoo aan ciqaabka Alle arkayn adduunkan, ciddiise xad gudubta intaas ka dib wuxuu mudan cadaab daran.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تَقْتُلُواْ ٱلصَّيْدَ وَأَنتُمْ حُرُمٌ ۚ وَمَن قَتَلَهُۥ مِنكُم مُّتَعَمِّدًا فَجَزَآءٌ مِّثْلُ مَا قَتَلَ مِنَ ٱلنَّعَمِ يَحْكُمُ بِهِۦ ذَوَا عَدْلٍ مِّنكُمْ هَدْيًۢا بَـٰلِغَ ٱلْكَعْبَةِ أَوْ كَفَّـٰرَةٌ طَعَامُ مَسَـٰكِينَ أَوْ عَدْلُ ذَٰلِكَ صِيَامًا لِّيَذُوقَ وَبَالَ أَمْرِهِۦ ۗ عَفَا ٱللَّهُ عَمَّا سَلَفَ ۚ وَمَنْ عَادَ فَيَنتَقِمُ ٱللَّهُ مِنْهُ ۗ وَٱللَّهُ عَزِيزٌ ذُو ٱنتِقَامٍ ﴿٩٥﴾

95. Kuwa xaqa rumeeyow ha dilina ugaadha idinkoo xarman, ciddiise disha oo idinka mid ah si kas ah waxaa saaran wuxuu dilay wax la mid ah oo xoolo ah oy xukumi labo caadil ah oo idinka mid ah isagoo ah hadyad gaadhi kacbada, ama kafaaro gud quudin masaakiin ama wax u dhigma oo soon ah inuu dhadhamiyo ciqaabta amarkiisa, wuu idinka saamaxay Alle wixii horreeyey ciddiise ku noqota wuu ka aarsan Alle, ilaahayna waa adkaade aarsada.

Aayaduhu waxay ka warrami in waqtiga la xarmado xajka ama cumrada ay reebban tahay in ugaadha la laayo, waxaana jirtay inuu Alle ku imtixaamay muslimiintii arrintaas si loo kala caddaado cidii saas fashana way xad-gudubtay, waxaana saaran inuu gudo ugaadhuu dilay wax la mid ah oo xoolo ah, waxaana qiimayn labo caadil ah oo muslimiinta ka mid ah, waxaana la geeyn xaramka makaad sadaqo ahaan, haddii kale wuxuu quudin masaakiin qiimihiisa ama wuu soomi si uu u dhadhamiyo ciqaabta gafkiisa, intaan layska

reebin wixii dhacay waa ka saamaxay Alle, ciddii ku noqotana wuu ka aarsan. Muqaatil binu Xayaan wuxuu yidhi: waxay soo degeen cumradii xudaybiyo, taasina waxay ku tusin inay waajib tahay inuu gawraco waqitga ixraamka. **[Al-Maa'idah: 94-95].**

أُحِلَّ لَكُمْ صَيْدُ ٱلْبَحْرِ وَطَعَامُهُۥ
مَتَٰعًا لَّكُمْ وَلِلسَّيَّارَةِ ۖ وَحُرِّمَ عَلَيْكُمْ
صَيْدُ ٱلْبَرِّ مَا دُمْتُمْ حُرُمًا ۗ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ
ٱلَّذِىٓ إِلَيْهِ تُحْشَرُونَ ﴿٩٦﴾

96. Waxaa laydiin banneeyey ugaadhsiga badda iyo cunnadeeda, (idinkoo xarman), iyadoo anfac u ah (idinka) iyo socotadaba; waxaana laydinka reebay ka ugaadhsiga barriga intaad xarman tihiin, ka dhawrsada Alleha xaggiisa laydiin soo kulmin.

* جَعَلَ ٱللَّهُ ٱلْكَعْبَةَ ٱلْبَيْتَ ٱلْحَرَامَ
قِيَٰمًا لِّلنَّاسِ وَٱلشَّهْرَ ٱلْحَرَامَ وَٱلْهَدْىَ
وَٱلْقَلَٰٓئِدَ ۚ ذَٰلِكَ لِتَعْلَمُوٓا۟ أَنَّ ٱللَّهَ يَعْلَمُ
مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِى ٱلْأَرْضِ وَأَنَّ
ٱللَّهَ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمٌ ﴿٩٧﴾

97. Wuxuu ka yeelay ilaahay kacbada bayd (guriga) xurmada leh, dhawridda dadka iyo bilaha xurmada leh iyo hadyada iyo tan la calaameeyey (hadyada darteed), waana inaad ogaataan in Alle og yahay waxa ku sugan samooyinka iyo dhulka iyo in Alle wax kasta og yahay.

ٱعْلَمُوٓا۟ أَنَّ ٱللَّهَ شَدِيدُ ٱلْعِقَابِ وَأَنَّ
ٱللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٩٨﴾

98. Ogaada in Alle ciqaabtiisu daran tahay Allana yahay dambi dhaafe naxariista.

مَّا عَلَى ٱلرَّسُولِ إِلَّا ٱلْبَلَٰغُ ۗ وَٱللَّهُ يَعْلَمُ مَا
تُبْدُونَ وَمَا تَكْتُمُونَ ﴿٩٩﴾

99. Ma saarra Rasuulka waxaan gaadhsiin ahayn, Allana waa og yahay waxaad muujinaysaan iyo waxaad qarinaysaan.

Aayadahanna waxay ka warrami in ilaahay u banneeyey muxrimka xajka iyo cumrada inuu cuno waxa badda laga soo saaro, waxaase laga reebay ka ugaadhsiga barriga intay xarman yihiin waana inay ka dhawrsadaan Allaha xaggiisa laysu soo kulmin, kacbadana wuxuu ilaahay ka yeelay guri sharaf leh oo xurma leh, dadkana maslaxo, iyo nabadgalyo ugu sugan tahay, sidoo kale bilaha xurmaysan iyo had-yadda xaramka loo wado, arrintaasna waxaa ugu wacan in ilaahay og yahay waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan, iyo

wax kastaba, waana in la ogaado in Alle ciqaab daran yahay, naxariistana, Rasuulkana waxaan gaadhsiinta xaqa ahayn ma saarna, Alle na wuu og yahay waxa la muujin iyo waxa la qarsanba. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi isagoo badda ka warrami: waa daahir biyaheedu, waana xalaal waxeeda dhinta, {Imaam Axmed). Waana waxyaalaha Alle dadka ugu nicmeeyey, kuna tusin awoodda Alle iyo naxariistiisa oy waajibna tahay in si fiican oo xaq iyo caddaalad ah loogu intifaaco laguna aqoonsado Alle iyo deeqdiisa, **[al-maa'idah: 96-99].**

قُل لَّا يَسْتَوِى ٱلْخَبِيثُ وَٱلطَّيِّبُ وَلَوْ أَعْجَبَكَ كَثْرَةُ ٱلْخَبِيثِ ۚ فَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ يَـٰٓأُو۟لِى ٱلْأَلْبَـٰبِ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿١٠٠﴾

100. Waxaad dhahdaa (Nabiyow) ma eka wax xun iyo wax fiican aadba la yaabtid badnida kan xune, kana dhawrsada Alle dadka caqliga lahow inaad liibaantaan.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تَسْـَٔلُوا۟ عَنْ أَشْيَآءَ إِن تُبْدَ لَكُمْ تَسُؤْكُمْ وَإِن تَسْـَٔلُوا۟ عَنْهَا حِينَ يُنَزَّلُ ٱلْقُرْءَانُ تُبْدَ لَكُمْ عَفَا ٱللَّهُ عَنْهَا ۗ وَٱللَّهُ غَفُورٌ حَلِيمٌ ﴿١٠١﴾

101. Kuwa xaqa rumeeyow ha warsannina waxyaalo haddii laydiin muujiyo idin murug galin, haddaana warsataan marka quraanka la soo dejin waa laydiin muujin, wuuna idinka cafiyey Alle xaggeeda, ilaahayna waa dambi dhaafe dul badan.

قَدْ سَأَلَهَا قَوْمٌ مِّن قَبْلِكُمْ ثُمَّ أَصْبَحُوا۟ بِهَا كَـٰفِرِينَ ﴿١٠٣﴾

102. Waxaa warsaday qoom idinka horreeyey markaasay noqdeen kuwo ka gaalooba (markii loo muujiyey).

Aayadahan waxay caddayn inaan xumaan iyo wanaag sinnayn, si kasto how badnaato xumaantuye, waana inay dhawrsadaan dadka caqliga leh ee wax garadka ah.

Taasina waxay ku tusin in waxa wanaagsani fiican yahay wuxuu yahayba, waxa xumina qiimo daran yahay si kasto how batee ama wuxuu dooni ha noqdee, waxaa kale oo aayadaha dambe ka warrami inaan la badinnin warsiga macna la'aaneed iyo ujeeddo xumo illeen diintu waa caddahaye, wixiise kaa qarsooma waa inaad si xushmad leh u warsataa ciddii garan, waxayna soo degeen aayaduhu mar Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) uu khudbad akhrinayey oo yidhi: haddaad og tihiin waxaan ogahay wax baban baad ooyi lahaydeen, wax yarna waad qosli lahaydeen markaasay asaxaabtii wajiga dabooleen, iyagoo ooyi, markaasuu nin warsaday aabahay waa kuma,

markaasay soo degeen aayaduhu, illeen yuhuud iyo nasaaro iyo gaaladii kalaba waxay warsan jireen warsi xun iyo madax adayg wayna ka gaaloobi jireen, wax warso laakiin si maamuusa iyo wax loo baahan yahay oo macquula oo wax tari. **[Al-Maa'idah: 100-102].**

مَا جَعَلَ ٱللَّهُ مِنۢ بَحِيرَةٍ وَلَا سَآئِبَةٍ
وَلَا وَصِيلَةٍ وَلَا حَامٍ وَلَٰكِنَّ ٱلَّذِينَ
كَفَرُواْ يَفۡتَرُونَ عَلَى ٱللَّهِ ٱلۡكَذِبَۖ
وَأَكۡثَرُهُمۡ لَا يَعۡقِلُونَ ١٠٣

103. Ma yeelin Alle xoolo caanahooda sanamyada loo bixiyo (baxiira) iyo xoolo sanamyada loo sii daayo (saa'ibo) iyo xoolo dhadig oo sanamyada lagu sadaqaysto (wasiilo) iyo riti sanamyada loo daayo (xaam) laakiin kuwii gaaloobay waxay ku been abuuraan Alle been, badankoodna wax ma kasayaan.

وَإِذَا قِيلَ لَهُمۡ تَعَالَوۡاْ إِلَىٰ مَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ
وَإِلَى ٱلرَّسُولِ قَالُواْ حَسۡبُنَا مَا وَجَدۡنَا
عَلَيۡهِ ءَابَآءَنَآۚ أَوَلَوۡ كَانَ ءَابَآؤُهُمۡ لَا
يَعۡلَمُونَ شَيۡـٔٗا وَلَا يَهۡتَدُونَ ١٠٤

104. Marka loo yidhaahdo u kaalaya waxa Alle soo dejiyey iyo xagga Rasuulkana waxay dhahaan waxaa nagu filan waxaan ka hellay aabayaalkanno, oo hadday aabayaalkood ayna wax ogayn hanuunsanaynna (ma raacayaan).

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ عَلَيۡكُمۡ
أَنفُسَكُمۡۖ لَا يَضُرُّكُم مَّن ضَلَّ إِذَا
ٱهۡتَدَيۡتُمۡۚ إِلَى ٱللَّهِ مَرۡجِعُكُمۡ جَمِيعٗا
فَيُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمۡ تَعۡمَلُونَ ١٠٥

105. Kuwa xaqa rumeeyow waxaa idin saaran naftiinna, idinma dhibo ciddii dhunta haddaad hanuunsantaan, xagga Alle umbaana noqoshadiinnu tahay dhammaan wuxuuna idinka warrami waxaad camal falayseen.

Jaahiliintii waxay ahaayeen kuwo aan Alle si fiican ugu xidhnayn, jaahil oo dhan caadadiisu waa saas, xoolahoodana waxay u bixin jireen waxaan dar Alle ahayn, sida sanamyada iyo waxa la midka ah, caanaha yey u bixin jireen neefkana way u sii dayn jireen sanamyada, hadday dhadig isku xijisiisana ama ritigu wax badan rimiyo waxay u sii dayn jireen sanamyada, waana been abuurasho aan xujo lahayn, marka quraanka iyo Rasuulka loogu yeedhana

waxay raacaan waxay aabbayaalkood oon wax ogayn hanuusanaynna ka heleen, taasina waa ceeb weyn, tan kale markaad toosnaato xaqana si dhab ah dadka u fartid ciddii diida oo dhunta waxba kaama saarra, mana aha ujeedada aayaduhu inaan xaqa la farin ee naftaada kaliya uun xil kaa saaran yahay, ma aha saas, waa inaad wanaag si fiican u farto, xumaantana si fiican uga reebto ka dib xil kuma saarra, waxaa jirta in dadka qaarkood si qalada u fahmeen aayaddan, oy dhaheen ani naftayda umbaa i saaran ee maxaa dad kale hadduu dhumi iga galay, ma jiro cid kaligeed uun toosnaan karta dadkuna dhunsan yahay, illeen dadku waa xubin kaliya oo kale, waxaana khaladkaas ka waaniyey dadka sayid Abuu Bakar oo yidhi: waxaad ku fasirtaan aayadda si aan sideedii ahayn, wanaagga fara xumaantana reeba, siduu Nabigu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee). **[Al-Maa'idah: 103-105].**

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ شَهَٰدَةُ بَيۡنِكُمۡ إِذَا حَضَرَ أَحَدَكُمُ ٱلۡمَوۡتُ حِينَ ٱلۡوَصِيَّةِ ٱثۡنَانِ ذَوَا عَدۡلٖ مِّنكُمۡ أَوۡ ءَاخَرَانِ مِنۡ غَيۡرِكُمۡ إِنۡ أَنتُمۡ ضَرَبۡتُمۡ فِي ٱلۡأَرۡضِ فَأَصَٰبَتۡكُم مُّصِيبَةُ ٱلۡمَوۡتِۚ تَحۡبِسُونَهُمَا مِنۢ بَعۡدِ ٱلصَّلَوٰةِ فَيُقۡسِمَانِ بِٱللَّهِ إِنِ ٱرۡتَبۡتُمۡ لَا نَشۡتَرِي بِهِۦ ثَمَنٗا وَلَوۡ كَانَ ذَا قُرۡبَىٰ وَلَا نَكۡتُمُ شَهَٰدَةَ ٱللَّهِ إِنَّآ إِذٗا لَّمِنَ ٱلۡأٓثِمِينَ ١٠٦

106. Kuwa xaqa rumeeyow maragga dhexdiinna ah markii mid idinka mid ah geeridu u timaaddo oo uu dardaarmi waa labo caadil oo idinka mid ah, ama labo kale oon idinka mid ahayn, markaad socdaal tihiin oo geeri idin hesho, idinkoo u diidaya inay baxaan salaadda dabadeed iyagoon marag furin, iyagoo ku dhaaran Alle, haddaad shakidaan inaannan ku gadanayn qiimo yar qaraababa ha ahaadee, qarinna mayno maragga Alle, markaas aan noqonno kuwa dambaabay.

فَإِنۡ عُثِرَ عَلَىٰٓ أَنَّهُمَا ٱسۡتَحَقَّآ إِثۡمٗا فَـَٔاخَرَانِ يَقُومَانِ مَقَامَهُمَا مِنَ ٱلَّذِينَ ٱسۡتَحَقَّ عَلَيۡهِمُ ٱلۡأَوۡلَيَٰنِ فَيُقۡسِمَانِ بِٱللَّهِ لَشَهَٰدَتُنَآ أَحَقُّ مِن شَهَٰدَتِهِمَا وَمَا ٱعۡتَدَيۡنَآ إِنَّآ إِذٗا لَّمِنَ ٱلظَّٰلِمِينَ ١٠٧

107. Haddii la ogaado inay muteen dambi waxaa meeshooda joogsan (oo la dhaarin) labo kale oo ah kuwa ugu mudnaan badan dhaxalkiisa, wayna ku dhaaran Alle inuu maraggoodu ka xaqsan yahay maraggooda, mana aannan xadgudbin, oo markaas aan noqonno daalimiin.

ذَٰلِكَ أَدۡنَىٰٓ أَن يَأۡتُواْ بِٱلشَّهَٰدَةِ عَلَىٰ وَجۡهِهَآ أَوۡ يَخَافُوٓاْ أَن تُرَدَّ أَيۡمَٰنُۢ بَعۡدَ أَيۡمَٰنِهِمۡۗ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ وَٱسۡمَعُواْۗ وَٱللَّهُ لَا يَهۡدِي ٱلۡقَوۡمَ ٱلۡفَٰسِقِينَ ١٠٨

108. Saasaana u dhaw inay maragga ula yimaadaan sidiisa fiican ama ay ka cabsadaan in la diido dhaartooda intay dhaartaan ka dib, ee ka dhawrsada Alle maqlana, Alle na ma hanuuniyo qoom faasiqiina.

Aayadahani waxay ka warrami in hadduu ruux socdaala geeri u timaaddo uu ku dardaarmi labo caadil oo muslim ah hortood haddii la waayana labo kale, iyagoo la dhaarin salaado dabadood inay run sheegi ooyan wax khayaamayn, oyna qarinayn xaqa, haddii la shakiyana waxaa badeli oo dhaaran inay xaqaas muteen labo ka mid ah kuwa ugu dhaw kii dhintay, waxayna ku dhaaran in iyagu ka run badan yihiin, saasaana u toosan in maragga ay u gutaan iyadoo saxiix ah si aan hadda ka dib loo celin maraggooda, waana Alle in laga yaabo, xaqana la maqlo, illeen Ilaahay ma hanuuniyo qoom faasiqiin ah, taasina waxay ku tusin siduu islaamku ugu dadaali dhawridda xuquuqda dadka, una qaddarin dadka diinta haysta, una fari caddaalad, Alle ka yaabid, sharaf dhawrid iyo wanaag ku dadaalid. **[Al-Maa'idah: 106-108]**

* يَوۡمَ يَجۡمَعُ ٱللَّهُ ٱلرُّسُلَ فَيَقُولُ مَاذَآ أُجِبۡتُمۡۖ قَالُواْ لَا عِلۡمَ لَنَآۖ إِنَّكَ أَنتَ عَلَّٰمُ ٱلۡغُيُوبِ ١٠٩

109. (Ka warran) maalintuu kulmin Alle rasuullada kuna dhihi maxaa laydiinku jawaabay oy dhihi ma ogin adiga unbaa u ogaal badan waxa maqan.

إِذۡ قَالَ ٱللَّهُ يَٰعِيسَى ٱبۡنَ مَرۡيَمَ ٱذۡكُرۡ نِعۡمَتِي عَلَيۡكَ وَعَلَىٰ وَٰلِدَتِكَ إِذۡ أَيَّدتُّكَ بِرُوحِ ٱلۡقُدُسِ تُكَلِّمُ ٱلنَّاسَ فِي ٱلۡمَهۡدِ وَكَهۡلٗاۖ وَإِذۡ عَلَّمۡتُكَ ٱلۡكِتَٰبَ وَٱلۡحِكۡمَةَ وَٱلتَّوۡرَىٰةَ وَٱلۡإِنجِيلَۖ وَإِذۡ تَخۡلُقُ مِنَ ٱلطِّينِ كَهَيۡـَٔةِ ٱلطَّيۡرِ بِإِذۡنِي فَتَنفُخُ فِيهَا فَتَكُونُ طَيۡرَۢا بِإِذۡنِيۖ وَتُبۡرِئُ ٱلۡأَكۡمَهَ وَٱلۡأَبۡرَصَ بِإِذۡنِيۖ وَإِذۡ تُخۡرِجُ ٱلۡمَوۡتَىٰ بِإِذۡنِيۖ وَإِذۡ كَفَفۡتُ بَنِيٓ إِسۡرَٰٓءِيلَ

110. (Xusuuso) markuu Alle dhihi Ciise binu Maryamow xusuuso nicmadaydii korkaaga ahayd iyo hooyadaaba markaan kugu xoojinnay ruuxii daahirka ahaa (Jibriil) ood kula hadlaysay dadka sariir ilmood iyo adoo meel dhaxaada. Iyo markaan ku baray kitaabka iyo xigmadda, iyo tawreed, injiil, iyo markaad ka yeelaysay dhoobada sidii shimbir idankayga ood afuufaysay oy

noqonaysay shimbir idankayga, ood bogsiinaysay indhoole ku dhashe iyo baraslaha idankayga, ood soo bixinaysay maydka idankayga, markaan kaa celiyay banii israa'iil markaad ula timid xujooyin, oy dheheen kuwii gaaloobay oo ka mida kani waxaan sixir ahayn ma aha.

عَنكَ إِذْ جِئْتَهُم بِٱلْبَيِّنَٰتِ فَقَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مِنْهُمْ إِنْ هَٰذَآ إِلَّا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿١١٠﴾

111. Markaan u waxyooday (ku ilhaameeyey) saaxiibbadii: rumeeya aniga iyo rassuulkayga oy dhaheen waan rumaynay ee marag ka noqo inaan muslimiin nahay.

وَإِذْ أَوْحَيْتُ إِلَى ٱلْحَوَارِيِّـۧنَ أَنْ ءَامِنُوا۟ بِى وَبِرَسُولِى قَالُوٓا۟ ءَامَنَّا وَٱشْهَدْ بِأَنَّنَا مُسْلِمُونَ ﴿١١١﴾

Aayadahan waxay ka warrami mucjisooyinkii Alle siiyey Nabi Ciise, sida lagu soo sheegay suuradda aal-cimraan, waxaas oo mucjiso ahna waxay ku tusin awoodda Alle, iyo inuu isaga uun khayrku ka yimaaddo, ayna waajib tahay in si dhab ah loo caabudo loona raaco sharcigiisa. Nabi Ciisana waa addoon Alle oo la mid ah Nabiyada kale iyo dadka, waana doqonnimo iyo waalli in la siiyo awood uusan mudan ama lagu sheego llaahnimo sida nasaaradu citiqaadiso, sidee ruux caqli leh u caabudi wax Allaha wax walba abuuray ka soo hadhay, waa la yaab, Alle nama dhumiyo. Aayadda hore iyadu waxay ka warrami inuu Alle qiyaamada warsan rasuullada isagoo og waxay ugu jawaabeen qoomkoodii, iyaguna xaalkoo dhan waxay u celiyeen Alle, khatarnimada qiyaamada iyo dhibaatada taalla, taasina waxay ku tusin inay waajib tahay dhab u caabudidda iyo ku xidhnaanta Alle iyo raacidda rasuullada. **[Al-Maa'idah: 109-111].**

112. (Xusuuso) markay dheheen xawaariyiintii Ciise ibnu Maryamow ma karaa Allehaa inuu nooga soo dejiyo xeedho (cunno) samada wuxuuna yidhi ka dhawrsada Alle haddaad mu'miniin tihiin.

إِذْ قَالَ ٱلْحَوَارِيُّونَ يَٰعِيسَى ٱبْنَ مَرْيَمَ هَلْ يَسْتَطِيعُ رَبُّكَ أَن يُنَزِّلَ عَلَيْنَا مَآئِدَةً مِّنَ ٱلسَّمَآءِ ۖ قَالَ ٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ﴿١١٢﴾

قَالُواْ نُرِيدُ أَن نَّأۡكُلَ مِنۡهَا وَتَطۡمَئِنَّ قُلُوبُنَا وَنَعۡلَمَ أَن قَدۡ صَدَقۡتَنَا وَنَكُونَ عَلَيۡهَا مِنَ ٱلشَّٰهِدِينَ ١١٣

113. Waxay dheheen waxaannu dooni inaan wax ka cunno oy xasisho quluubtanadu oon ogaanno inaad run noo sheegi oonnu noqonno kuwa ka marag kaca.

قَالَ عِيسَى ٱبۡنُ مَرۡيَمَ ٱللَّهُمَّ رَبَّنَآ أَنزِلۡ عَلَيۡنَا مَآئِدَةٗ مِّنَ ٱلسَّمَآءِ تَكُونُ لَنَا عِيدٗا لِّأَوَّلِنَا وَءَاخِرِنَا وَءَايَةٗ مِّنكَۖ وَٱرۡزُقۡنَا وَأَنتَ خَيۡرُ ٱلرَّٰزِقِينَ ١١٤

114. Wuxuu yidhi Ciise binu Maryama Ilaahayow Rabbigeenow nooga soo deji xeedho samada u noqota ciid kaannaga hore iyo kaannaga dambe iyo aayad xaggaaga ka ahaatay nana arzaaq adaa arzaaqe u khayr roone.

قَالَ ٱللَّهُ إِنِّي مُنَزِّلُهَا عَلَيۡكُمۡۖ فَمَن يَكۡفُرۡ بَعۡدُ مِنكُمۡ فَإِنِّيٓ أُعَذِّبُهُۥ عَذَابٗا لَّآ أُعَذِّبُهُۥٓ أَحَدٗا مِّنَ ٱلۡعَٰلَمِينَ ١١٥

115. Wuxuuna yidhi Alle waan ku soo dejin korkiinna ee ciddii ka gaalowda ka dib oo idin ka mid ah waxaan cadaabi cadaab aannan cadaabayn ruux caalamka ka mid ah.

Aayadahan waxay ka warrami maa'iddada lagu magacaabay suuradda, waxayna ka mid tahay mucjisooyinka Alle Nabi Ciise ku mannaystay, taasoo ah inay warsadeen in Alle samada cunno uga soo dejiyo, markuu Nabi Ciise ka waaniyeyna waxay sheegeen inay dooni inay wax ka cunaan, qalbigooduna xasilo, ogaadaanna runta Nabi Ciise, maragna ay ka noqdaan, markuu Nabi Ciise baryey Alle inuu u soo dejiyo, si ay ciid ugu ahaato mid hore iyo mid dambaba, iyo calaamadba, Alle na wuxuu u yaboohay inuu soo dejin, ciddiise ka gaaloowda wuxuu u cadaabi cadaab aan cid kale la cadaabin, warsashada saasoo kale ahna waa laga fiican yahay, ruuxu waa inuu rumeeyo awoodda Alle, wixii anficina uu warsado, isagoon madax adayg iyo xumaan uga qasdin, dhabtuna waa in Alle wax walba ahaysiiyey, fali wuxuu doono, Nabiyadana ay run sheegi, oyna waajib tahay in dhab loo rumeeyo dhammaan lana raaco xaqay u yeedhi, si loo liibaano. **[Al-Maa'idah: 112-115].**

وَإِذۡ قَالَ ٱللَّهُ يَٰعِيسَى ٱبۡنَ مَرۡيَمَ ءَأَنتَ قُلۡتَ لِلنَّاسِ ٱتَّخِذُونِي وَأُمِّيَ إِلَٰهَيۡنِ

116. (Xusuuso) markuu yidhi Alle, Ciise binu Maryamow ma adaa ku yidhi dadka ka yeesha ani

مِن دُونِ ٱللَّهِ ۖ قَالَ سُبْحَٰنَكَ مَا يَكُونُ لِيٓ أَنْ أَقُولَ مَا لَيْسَ لِي بِحَقٍّ ۚ إِن كُنتُ قُلْتُهُۥ فَقَدْ عَلِمْتَهُۥ ۚ تَعْلَمُ مَا فِي نَفْسِي وَلَآ أَعْلَمُ مَا فِي نَفْسِكَ ۚ إِنَّكَ أَنتَ عَلَّٰمُ ٱلْغُيُوبِ ﴿١١٦﴾

iyo hooyaday ilaahyo Alle ka sokow, uuna yidhi waad nasahan tahay iguma habboona inaan dhaho waxaanan xaq u lahayn, haddaan idhina waad og tahay, waxaadna og tahay waxa naftayda ku sugan aniguse ma ogi waxa aad iga qarinayso, adiga unbaa ah kan waxa maqan og.

مَا قُلْتُ لَهُمْ إِلَّا مَآ أَمَرْتَنِي بِهِۦٓ أَنِ ٱعْبُدُوا۟ ٱللَّهَ رَبِّي وَرَبَّكُمْ ۚ وَكُنتُ عَلَيْهِمْ شَهِيدًا مَّا دُمْتُ فِيهِمْ ۖ فَلَمَّا تَوَفَّيْتَنِي كُنتَ أَنتَ ٱلرَّقِيبَ عَلَيْهِمْ ۚ وَأَنتَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ شَهِيدٌ ﴿١١٧﴾

117. Kuma dhihin waxaad i fartay waxaan ahayn, oo ah caabuda Rabbigey iyo Rabbigiin, waxaana ku ahaay marag intaan ku noolaa dhexdooda, markaad i oofsatayna (oo aad kor ii qaadday) adaa ilaaliye u ahaa, adi umbaana wax walba marag u ah.

إِن تُعَذِّبْهُمْ فَإِنَّهُمْ عِبَادُكَ ۖ وَإِن تَغْفِرْ لَهُمْ فَإِنَّكَ أَنتَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿١١٨﴾

118. Haddaad cadaabto waa uun addoomadaadii, haddaad u dhaaftana adi umbaa adkaade falsan ah.

Aayadahani waa gooddi Ilaahay u jeediyey nasaarada caabuday Nabi Ciise iyo hooyadiis, isagoo Alle ku yidhi Nabi Ciise: ma adaa u yidhi dadka ilaah ka yeesha aniga iyo hooyaday Alle ka sokow, Ilaahayna wuu og yahay inuusan Nabi Ciise farin xaalkaas ee waa cabsi galin kuwiii caabuday, Nabi Ciisana wuxuu ku jawaabay in Alle ka nasahan yahay waxaas, xaqna uma lihi inaan sheegto waxaanan mudan, haddaan idhi iyo haddii kalaba waa og tahay, waxaad og tahay naftayda waxa ku sugan aniguse ma ogi waxa aad iga qarinaydo, adiga unbaa wax walba oo maqan og. Waxaan Alle caabuda ahayn ma farin, intaan dhex-joogay anaa u marag ah markaad i oofsatay, oo aad kor ii qaadday adigaa ilaaliye u ahaa, oo wax walba ka marag ah, haddaad cadaabtana waa addoomadaadii, haddaad u dhaaftana adigaa adkaade falsan ah.

Waana kaas hadalkii Nabi Ciise, oo ah in cibaadada Alle kaliya uu farayey, wax in la caabudo mudan oon Alle ahayna ma jiro, isagaa xaq u leh cibaado iyo waynaynba. **[Al-Maa'idah: 116-118].**

قَالَ ٱللَّهُ هَٰذَا يَوۡمُ يَنفَعُ ٱلصَّٰدِقِينَ صِدۡقُهُمۡۚ لَهُمۡ جَنَّٰتٞ تَجۡرِي مِن تَحۡتِهَا ٱلۡأَنۡهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدٗاۖ رَّضِيَ ٱللَّهُ عَنۡهُمۡ وَرَضُواْ عَنۡهُۚ ذَٰلِكَ ٱلۡفَوۡزُ ٱلۡعَظِيمُ ١١٩

119. Wuxuu yidhi Alle kani (maanta) waa maalinta ay anfici kuwa runta sheega runtoodu, waxaana u sugnaaday jannooyin ay socoto dhexdeeda wabiyaal iyagoo ku waari dhexdeeda waligood, waxaana ka raalli noqday Alle iyana way ka raalli noqdeen, taasina waa liibaanta wayn.

لِلَّهِ مُلۡكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ وَمَا فِيهِنَّۚ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَيۡءٖ قَدِيرُۢ ١٢٠

120. Allaa iska leh xukunka samooyinka iyo dhulka iyo waxa ku dhex sugan Alle na wax kasta wuu karaa.

Alle na wuxuu sheegay in qiyaamada ay anfici runtu ciddii runle ahayd, oy jannana gali iyadoo ku waari Alle ayaana ka raalli noqon iyana way ka raalli noqon, taasina waa liibaan wayn, xukunka samooyinka iyo dhulka iyo waxa ku dhex-jirana Alle ayaa iska leh, wax walbana wuu karaa, wax walbana awooddiisay ku jiraan, waxaana run sheegay Nabi Ciise iyo inta la mid ah ee cibaadada Alle u qirtay, waxaana been sheegay nasaarada iyo waxa la mid ah ee caabudi wax Alle ka soo hadhay. **[Al-Maa'idah: 119-120].**

Suurat Al-Ancaam

سُورَةُ الأَنعَامِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Mahad Alle ayaa iska leh ahna kan abuuray samooyinka iyo dhulka, yeelayna mugdiyada iyo nuurka, kuwa gaaloobayse Rabbigood yey wax la simi (la caabudi).

ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ ٱلَّذِى خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ وَجَعَلَ ٱلظُّلُمَٰتِ وَٱلنُّورَ ۖ ثُمَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ بِرَبِّهِمْ يَعْدِلُونَ ﴿١﴾

2. Alle waa kan idinka abuuray dhoobo markaas xukumay ajal (muddo), ajal magacaaban yaana agtiisa ah, idinkuse gaalooy waad shakisan tihiin.

هُوَ ٱلَّذِى خَلَقَكُم مِّن طِينٍ ثُمَّ قَضَىٰٓ أَجَلًا ۖ وَأَجَلٌ مُّسَمًّى عِندَهُۥ ۖ ثُمَّ أَنتُمْ تَمْتَرُونَ ﴿٢﴾

3. Alle waa ka ay caabudaan samooyinka waxa ku sugan iyo waxa dhulka ku sugan, wuxuuna og yahay qarsoodigiinna iyo muujiskiinna, wuxuuna og yahay, waxaad kasbanaysaan.

وَهُوَ ٱللَّهُ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَفِى ٱلْأَرْضِ يَعْلَمُ سِرَّكُمْ وَجَهْرَكُمْ وَيَعْلَمُ مَا تَكْسِبُونَ ﴿٣﴾

Alleheen wuxuu ku billaabay suuraddan ammaantiisa iyo siduu u abuurey cirka iyo dhulka, iyo mugdiga iyo nuurka, dadkana ka ahaysiiyey dhoobo «aabahood aadan», muddana u yeelay, mana habboona in wax lala caabudo, ama la shakiyo, waana Ilaaha xaqa ah ee cirka waxa ku sugan iyo llaaha xaqa ah ee dhulka waxa ku sugan, ogna qarsoodiga dadka iyo muujiskooda iyo waxay kasban ba.

Waxayna aayaduhu adkayn ilaahnimada Alle iyo awooddiisa iyo xaqnimadiisa mudan yahayna mahad, cibaado iyo raacidda sharcigiisa. **[Al-Ancaam: 1-3].**

وَمَا تَأْتِيهِم مِّنْ ءَايَةٍ مِّنْ ءَايَٰتِ رَبِّهِمْ إِلَّا كَانُوا۟ عَنْهَا مُعْرِضِينَ ﴿٤﴾

4. Aayaddii u timaadda oo aayadaha Allehaa ka mid ah way ka jeedsadaan.

فَقَدْ كَذَّبُوا۟ بِٱلْحَقِّ لَمَّا جَآءَهُمْ فَسَوْفَ يَأْتِيهِمْ أَنۢبَٰٓؤُا۟ مَا كَانُوا۟ بِهِۦ يَسْتَهْزِءُونَ ﴿٥﴾

5. Waxayna dhab u beeniyeen xaqii markuu u yimid waxaase u imaan doona (cidhibta) warkay ku jees jeesayeen.

أَلَمْ يَرَوْا۟ كَمْ أَهْلَكْنَا مِن قَبْلِهِم مِّن قَرْنٍ مَّكَّنَّٰهُمْ فِى ٱلْأَرْضِ مَا لَمْ نُمَكِّن لَّكُمْ وَأَرْسَلْنَا ٱلسَّمَآءَ عَلَيْهِم مِّدْرَارًا وَجَعَلْنَا ٱلْأَنْهَٰرَ تَجْرِى مِن تَحْتِهِمْ فَأَهْلَكْنَٰهُم بِذُنُوبِهِمْ وَأَنشَأْنَا مِنۢ بَعْدِهِمْ قَرْنًا ءَاخَرِينَ ﴿٦﴾

6. Miyeyna arkayn intaan halaagnay hortood (wax badan) oo qarniyo ah, oon ku makaninnay (siinnay) dhulka waxaannaan idin makanin (siinnin) waxaan uga soo deynay samada (roob) darar ah, waxaana ka yeellay wabiyada kuwo socda dhexdooda, waanse halaagnay dambigooda dartiis waxaanna ahaysiinnay gadaashood qarni kale.

Aayadahani waxay ka warrami madax adaygga gaalada oo mar kastoo ay u timaaddo mucjisad beeniya oo xaqa ka jeedsada, waxayse la kulmi doonaan ciqaabta madax adaygoodaas, maxaa yeelay hortood wax badan baa la halaagay kuwo ka xoog badan oo loo barwaaqeeyey, kuwa kalana lagu baddalay, taasina waxay ku tusin inaan cidna isku hallayn awood, illeen wax kastaba Alle ayaa ka awood badane, oo ka yeelay dad wax isbidayey sheeko iyo meel madhan, iyo raad cidla ah. **[Al-Ancaam: 4-6].**

وَلَوْ نَزَّلْنَا عَلَيْكَ كِتَٰبًا فِى قِرْطَاسٍ فَلَمَسُوهُ بِأَيْدِيهِمْ لَقَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓا۟ إِنْ هَٰذَآ إِلَّا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿٧﴾

7. Haddaan kugu soo dejinno Nabiyow kitaab qoran oo ay ku taabtaan gacmahooda waxay odhan kuwii gaaloobay kani waxaan sixir cad ahayn ma aha.

وَقَالُوا۟ لَوْلَآ أُنزِلَ عَلَيْهِ مَلَكٌ ۖ وَلَوْ أَنزَلْنَا مَلَكًا لَّقُضِىَ ٱلْأَمْرُ ثُمَّ لَا يُنظَرُونَ ﴿٨﴾

8. Waxayna dhihi maa lagu soo dejiyo malag, haddaan soo dejinno malagna waxaa la dhammayn lahaa amarka (halaagga) lamana sugeen.

9. Haddaan ka yeello malagna waxaan ka yeeli lahayn nin, markaasaan iskaga dari lahayn xaalka siday isaga dari jireen.

وَلَوْ جَعَلْنَٰهُ مَلَكًا لَّجَعَلْنَٰهُ رَجُلًا وَلَلَبَسْنَا عَلَيْهِم مَّا يَلْبِسُونَ ﴿٩﴾

10. Waxaa dhab ahaan loogu jeesjeesay rasuullo kaa horreeyey waxaana kuwii jees jeesay ku dhacay (ciqaabti) waxay ku jees jeeseen.

وَلَقَدِ ٱسْتُهْزِئَ بِرُسُلٍ مِّن قَبْلِكَ فَحَاقَ بِٱلَّذِينَ سَخِرُوا۟ مِنْهُم مَّا كَانُوا۟ بِهِۦ يَسْتَهْزِءُونَ ﴿١٠﴾

11. Waxaad dhahdaa ku socda dhulka oo eega siday noqotay cidhibtii beeniyeyaasha xaqa.

قُلْ سِيرُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ ثُمَّ ٱنظُرُوا۟ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلْمُكَذِّبِينَ ﴿١١﴾

Aayadahan wuxuu Alle kaga warrami madax adaygga gaalada iyo in si kastoo xaqa loo tuso ay diidi kana jeedsan, waxayna dooni in malag lagu soo dejiyo, haddii lagu soo dejiyana waxaa loo yeeli lahaa suuro dad inay arkaan, markaasay haddana diidi lahaayeen, waxaana shaqadooda ka mid ah jees jees iyo isla weyni, waxayse noqotaa cidhibta jees-jeesaha ciqaab iyo halaag ee dhulka mar si aad u ogaato waxa ku dhacay gaaladaas xaqa beeniyey, waxaase habboon rumaynta xaqa iyo raaciddiisa iyo ka fogaanta xumaanta iyo xaqqdiidka iyo isla waynida. **[Al-Ancaam: 7-11].**

12. Waxaad dhahdaa yaa leh waxa ku sugan samooyinka iyo dhulka, dheh Alle, wuxuuna isa saaray naxariis, wuxuuna idin kulmin maalinta qiyaame shakina ma leh, kuwa khasaariyey naftoodase ma rumaynayaan.

قُل لِّمَن مَّا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۖ قُل لِّلَّهِ ۚ كَتَبَ عَلَىٰ نَفْسِهِ ٱلرَّحْمَةَ ۚ لَيَجْمَعَنَّكُمْ إِلَىٰ يَوْمِ ٱلْقِيَٰمَةِ لَا رَيْبَ فِيهِ ۚ ٱلَّذِينَ خَسِرُوٓا۟ أَنفُسَهُمْ فَهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿١٢﴾

13. Alle waxaa u sugnaaday waxa xasila habbenkii iyo maalintiiba waana maqle oge ah.

* وَلَهُۥ مَا سَكَنَ فِى ٱلَّيْلِ وَٱلنَّهَارِ ۚ وَهُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْعَلِيمُ ﴿١٣﴾

14. Waxaad dhahdaa ma wax Alle ka soo hadhay yaan ka yeelan wali (la caabudo), isagoo Allana ah kan abuuray samooyinka iyo

قُلْ أَغَيْرَ ٱللَّهِ أَتَّخِذُ وَلِيًّا فَاطِرِ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَهُوَ يُطْعِمُ وَلَا يُطْعَمُ ۗ قُلْ إِنِّىٓ أُمِرْتُ أَنْ أَكُونَ

dhulka isagaana wax quudiya lamase quudiyo, waxaad dhahdaa waxaa lay faray inaan noqdo kan ugu horreeya cid islaanta (hogaansanta ummaddan) oonan ka mid noqonninna mushrikiinta.

أَوَّلَ مَنْ أَسْلَمَ ۖ وَلَا تَكُونَنَّ مِنَ ٱلْمُشْرِكِينَ ﴿١٤﴾

15. Waxaad dhahdaa anigu waxaan ka cabsan haddaan caasiyo Rabbigay cadaab maalin wayn.

قُلْ إِنِّيٓ أَخَافُ إِنْ عَصَيْتُ رَبِّى عَذَابَ يَوْمٍ عَظِيمٍ ﴿١٥﴾

16. Ciddii laga iilo cadaabka maalintaas wuu u naxariistay Alle, taasina waa liibaanta cad.

مَّن يُصْرَفْ عَنْهُ يَوْمَئِذٍ فَقَدْ رَحِمَهُۥ ۚ وَذَٰلِكَ ٱلْفَوْزُ ٱلْمُبِينُ ﴿١٦﴾

Ilaaheen wuxuu nooga warrami inuu leeyahay xukunka cirka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya iyo in naxariistiisu badan tahay, siduu xadiith qudsi ah ku yidhi: naxariistaydaa ka badan cadhadayda, isagaana dadka u soo kulmin qiyaamaha shaki la'aan, ciddii khasaarisay nafteedase ma rumayso, waxa xasila habeenka iyo dharaarta iyo waxa dhaq-dhaqaaqana Alle ayaa iska leh, waana maqle oge ah, wax xaq lagu caabudo oon isaga ahayna ma jiro, waana quudiye aan la quudinnin, waana in loo hoggaansamo, gaaladana laga fogaado illeen cadaab maalin wayn yaa jirta ciddii laga ilaaliyana uu liibaanaye. **[Al-Ancaam: 12-16].**

17. Hadduu ku taabsiiyo Alle dhib wax faydi ma jiro isaga mooyee hadduu ku taabsiiyo khayrna isagaa wax walba kara.

وَإِن يَمْسَسْكَ ٱللَّهُ بِضُرٍّ فَلَا كَاشِفَ لَهُۥٓ إِلَّا هُوَ ۖ وَإِن يَمْسَسْكَ بِخَيْرٍ فَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿١٧﴾

18. Waana ka adkaadaha addoomadiisa korkooda waana falsame xeel dheer.

وَهُوَ ٱلْقَاهِرُ فَوْقَ عِبَادِهِۦ ۚ وَهُوَ ٱلْحَكِيمُ ٱلْخَبِيرُ ﴿١٨﴾

19. Waxaad dhahdaa yaa ugu wayn marag waxaad dhahdaa Alle ayaa maragga dhexdeenna ah, waxaana lay waxyooday quraankan inaan idiinku digo idinka iyo cidduu gaadho, idinku

قُلْ أَىُّ شَىْءٍ أَكْبَرُ شَهَٰدَةً ۖ قُلِ ٱللَّهُ ۖ شَهِيدٌۢ بَيْنِى وَبَيْنَكُمْ ۚ وَأُوحِىَ إِلَىَّ هَٰذَا ٱلْقُرْءَانُ لِأُنذِرَكُم بِهِۦ وَمَنۢ بَلَغَ ۚ أَئِنَّكُمْ لَتَشْهَدُونَ أَنَّ مَعَ ٱللَّهِ ءَالِهَةً

أُخْرَىٰ ۚ قُل لَّآ أَشْهَدُ ۚ قُلْ إِنَّمَا هُوَ إِلَٰهٌ وَٰحِدٌ وَإِنَّنِى بَرِىٓءٌ مِّمَّا تُشْرِكُونَ ﴿١٩﴾

ma waxaad marag furaysaan inay Alle la jiraan ilaahyo kale, waxaad dhahdaa ma marag furayo (saas), waxaad dhahdaa Alle waa macbuudka kali ah ee cibaada naga mudan. Anuguna waxaan ka bari ahay waxaad la wadaajinaysaan.

ٱلَّذِينَ ءَاتَيْنَٰهُمُ ٱلْكِتَٰبَ يَعْرِفُونَهُۥ كَمَا يَعْرِفُونَ أَبْنَآءَهُمُ ۘ ٱلَّذِينَ خَسِرُوٓا۟ أَنفُسَهُمْ فَهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٢٠﴾

20. Kuwaan siinnay kitaabka waxay u yaqaannaan Nabiga (xaqnimadiisa) siday u yaqaannaan caruurtooda, kuwa khasaariyey naftoodana ma rumeeyaan (xaqa).

وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنِ ٱفْتَرَىٰ عَلَى ٱللَّهِ كَذِبًا أَوْ كَذَّبَ بِـَٔايَٰتِهِۦٓ ۚ إِنَّهُۥ لَا يُفْلِحُ ٱلظَّٰلِمُونَ ﴿٢١﴾

21. Wax ka dulmi badanna ma jirto cid ku abuurtay Alle been ama beeniyey aayaadkiisa mana liibaanto daalimiintu.

Alle ayaa hanta nacfi iyo dhibba isagaana wax kasta kara, awooddana leh, maragna isagaa u wayn, quraankuna waa digniinta caalamka, Alle mooyee macbuud kaloo xaq lugu caabudo ma jiro, ehelu kitaabkana (yuhuud iyo nasaare weeye) way yaqaannaan xaqnimada quraanka iyo Nabiga siday carruurtooda u yaqannaan, kuwa naftooda khasaariyayse wax ma rumeeyaan, cid ka dulmi badanna ma jirto ruux ku been abuurtay Alle ama beeniyey aayaadkiisa, daalimna ma liibaano, waxaa la weriyay xadiith ah: wax ka gaadhsiiya Alle, ruuxii ay soo gaarto aayad kitaabka Alle ah wuu soo gaadhay amarkii Alle. Mursal Qataada, Dabari ayaa weriyay. **[Al-Ancaam: 17-21].**

وَيَوْمَ نَحْشُرُهُمْ جَمِيعًا ثُمَّ نَقُولُ لِلَّذِينَ أَشْرَكُوٓا۟ أَيْنَ شُرَكَآؤُكُمُ ٱلَّذِينَ كُنتُمْ تَزْعُمُونَ ﴿٢٢﴾

22. Ka warran maalintaan kulmineyno (dadka) dhammaan markaas aan ku dhahayno kuwii la wadaajiyey aaway kuwaad la wadaajiseen (Alle cibaadada) aadna ahaydeen kuwo sheegan (inay wax tari).

ثُمَّ لَمۡ تَكُن فِتۡنَتُهُمۡ إِلَّآ أَن قَالُواْ وَٱللَّهِ رَبِّنَا مَا كُنَّا مُشۡرِكِينَ ﴿٢٣﴾

23. Markaas xujadoodii ma ahayn inay dhahaan mooyee: Alle Ayaan ku dhaarannaye maannaan ahayn mushrikiin (Alle wax la wadaajiya).

ٱنظُرۡ كَيۡفَ كَذَبُواْ عَلَىٰٓ أَنفُسِهِمۡۚ وَضَلَّ عَنۡهُم مَّا كَانُواْ يَفۡتَرُونَ ﴿٢٤﴾

24. Bal day say ugu been sheegeen naftooda ugana dhumay waxay been abuuran jireen.

وَمِنۡهُم مَّن يَسۡتَمِعُ إِلَيۡكَۖ وَجَعَلۡنَا عَلَىٰ قُلُوبِهِمۡ أَكِنَّةً أَن يَفۡقَهُوهُ وَفِيٓ ءَاذَانِهِمۡ وَقۡرٗاۚ وَإِن يَرَوۡاْ كُلَّ ءَايَةٖ لَّا يُؤۡمِنُواْ بِهَاۖ حَتَّىٰٓ إِذَا جَآءُوكَ يُجَٰدِلُونَكَ يَقُولُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓاْ إِنۡ هَٰذَآ إِلَّآ أَسَٰطِيرُ ٱلۡأَوَّلِينَ ﴿٢٥﴾

25. Waxaa ka mida kuwo ku dhagaysan waxaana yeellay quluubtooda dabool inay kasaan (quraanka) dhagahoodana waxaan yeellay culays, hadday arkaan aayaad kasta ma rumaynayaan, markay kuu yimaaddaanna way kula murmaan iyagoo dhihi kuwii gaaloobay kani (quraanku) ma aha waxaan warkii kuwii hore ahayn.

وَهُمۡ يَنۡهَوۡنَ عَنۡهُ وَيَنۡـَٔوۡنَ عَنۡهُۖ وَإِن يُهۡلِكُونَ إِلَّآ أَنفُسَهُمۡ وَمَا يَشۡعُرُونَ ﴿٢٦﴾

26. Waxayna ka reebi dadka rumaynta Nabiga iyaguna way ka fogaan mana halaagayaan waxaan naftooda ahayn, mase oga.

Qiyaamada wuu soo kulmin Alle gaalada iyo waxay caabudayeen, wayna inkiraan, waase beenin naftoodu, waxaa ka mid ahaa gaaladii kuwo dhagaysan akhriska quraanka lagana yeelay quluubtooda dabool, dhagahoodana culays, aayad kastooy arkaanna ma rumeeyaan, markay Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ay u yimaaddaanna way la murmaan iyagoo ku sheegi quraanka wararkii hore, dadkana way ka reebi quraanka inay rumeeyaan iyaguna way ka fogaan, waxaan naftooda ahaynna ma halaagaan, mase kasayaan. **[Al-Ancaam: 22-26].**

27. Haddaad aragto marka la joojin gaalada naarta korkeeda oy dhihi shallaytee maa inala celiyo oo aannaan beenin aayaadka Rabbigeen oo noqonno kuwa rumeeyey, (waxaad arki lahayd arrin wayn).

وَلَوْ تَرَىٰٓ إِذْ وُقِفُوا۟ عَلَى ٱلنَّارِ فَقَالُوا۟ يَٰلَيْتَنَا نُرَدُّ وَلَا نُكَذِّبَ بِـَٔايَٰتِ رَبِّنَا وَنَكُونَ مِنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٢٧﴾

28. Waxaase u muuqday waxay qarinayeen horay, haddii la celiyana waxay ku noqon lahaayeen wixii laga reebay waana beenaalayaal.

بَلْ بَدَا لَهُم مَّا كَانُوا۟ يُخْفُونَ مِن قَبْلُ ۖ وَلَوْ رُدُّوا۟ لَعَادُوا۟ لِمَا نُهُوا۟ عَنْهُ وَإِنَّهُمْ لَكَٰذِبُونَ ﴿٢٨﴾

29. Waxay dhihi wax kale ma jiro ee waannu ku noolaan adduunyada nalamana soo bixinaayo.

وَقَالُوٓا۟ إِنْ هِىَ إِلَّا حَيَاتُنَا ٱلدُّنْيَا وَمَا نَحْنُ بِمَبْعُوثِينَ ﴿٢٩﴾

30. Haddad aragto marka la hor joojiyo Rabbigood oo ku dhaho miyuuna kan xaq ahayn, oy dhahaan waa xaq Alle Ayaan ku dhaarannaye oo uu ku dhaho dhadhamiya cadaabka gaalnimadiinna darteed (waxaad arki arrin wayn).

وَلَوْ تَرَىٰٓ إِذْ وُقِفُوا۟ عَلَىٰ رَبِّهِمْ ۚ قَالَ أَلَيْسَ هَٰذَا بِٱلْحَقِّ ۚ قَالُوا۟ بَلَىٰ وَرَبِّنَا ۚ قَالَ فَذُوقُوا۟ ٱلْعَذَابَ بِمَا كُنتُمْ تَكْفُرُونَ ﴿٣٠﴾

Alle wuxuu ka warrami xaalka gaalada markay joogaan qiyaamada, taasoo ah inay calaacali oy dooni in dib loo celiyo si ay u rumeeyaan, waxaase dhab ah haddii la celiyana inay beenin lahaayeen waana beenaalayaal, waxayna sheegan inay iska noolaan lana soo bixinaynin, waase la guulguuli qiyaamada wuxuuna ku dhammaan xaalku in lagu dhoho dhadhamiya cadaabka gaalnimadiinna darteed. Maalinta qiyaame yeyna kala caddaan xaqa iyo xumaantu waana tay wax walba kala soocmi, labo waddana la kala qaadi janno iyo naar. **[Al-Ancaam: 27-30].**

31. Waxaa dhab u khasaaray kuwa beeniyey la kulanka Alle, markay ugu timaaddo saacadda (qiyaame) si kada ahna waxay

قَدْ خَسِرَ ٱلَّذِينَ كَذَّبُوا۟ بِلِقَآءِ ٱللَّهِ ۖ حَتَّىٰٓ إِذَا جَآءَتْهُمُ ٱلسَّاعَةُ بَغْتَةً قَالُوا۟ يَٰحَسْرَتَنَا عَلَىٰ مَا فَرَّطْنَا فِيهَا

dhahaan shallaytadanno waxaan ku gabood fallay dhexdeeda, waxayna ku xambaari dambigooda dhabarkooda waxaana xumaan badan waxay xambaari.

وَهُمْ يَحْمِلُونَ أَوْزَارَهُمْ عَلَىٰ ظُهُورِهِمْ ۚ أَلَا سَآءَ مَا يَزِرُونَ ﴿٣١﴾

32. Nolosha adduunyana ma aha waxaan ciyaar iyo madadaalo ahayn, guriga aakharaana u khayr roon kuwa dhawrsan ee miyeydaan wax kasayn.

وَمَا ٱلْحَيَوٰةُ ٱلدُّنْيَآ إِلَّا لَعِبٌ وَلَهْوٌ ۖ وَلَلدَّارُ ٱلْءَاخِرَةُ خَيْرٌ لِّلَّذِينَ يَتَّقُونَ ۗ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿٣٢﴾

33. Waxaan ognahay inuu ku walbahaarin waxay sheegi dhab ahaan kuuma beeninayaan laakiin daalimiintu aayaadka Alle yey diidi.

قَدْ نَعْلَمُ إِنَّهُۥ لَيَحْزُنُكَ ٱلَّذِى يَقُولُونَ ۖ فَإِنَّهُمْ لَا يُكَذِّبُونَكَ وَلَٰكِنَّ ٱلظَّٰلِمِينَ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ يَجْحَدُونَ ﴿٣٣﴾

Alleheen wuxuu noo sheegi khasaaraha kuwa beeniya saacadda qiyaame intay uga timaaddo kado, oo shalleeytoodaan waxay faleen ee xumaa iyagoo xambaarsan dambigoodii, waxaa la weriyay in camalka xun uu suuro xun iyo suudh xun ugu imaan saaxiibkiis, uuna dhabarka ka fuuli oo qiyaamada tagi isagoo xambaarsan. Mursal. Ibnu abi Xaatim.

Tan kale nolosha adduun waa ciyaar ee guriga aakharo yaa u khayr roon kuwa xumaanta ka dhawrsada. Waxaana jirtay in warka gaaladu walbahaar galin jiray Rasuulka (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) hase yeeshee dhab ahaan uma beenayn isaga ee waxay diidayeen uun aayaadka Alle iyo xaqa, waxaa jirtay inuu Abu Jahal la kulmay Nabiga maalin uuna gacan qaaday markaas lagu yidhi: war ma kaas leexday yaad gacanqaadi, markaas uu yidhi: Alle Ayaan ku dhaartaye waxaan ogahay inuu Nabi yahay, laakiin goormaan Cabdi Manaaf u noqonnay daba gal. Waxaana jirtay inay Abuu Jahal iyo Abuu Sufyaan iyo Akhnas u kala dhuumani jireen dhagaysiga quraanka. Saasaana u aragtaa say u khayaamayeen dadka kale, oo ugu sheegi jireen beenta. **[Al-Ancaam: 31-33].**

34. Waxaa dhab loo beeniyey rasuullo kaa horreeyey waana ku samreen wixii lagu beeniyey waana la dhibay intuu uga yimaaddo gargaarkannagu, wax bedeli hadalka Alle na ma jiro,

وَلَقَدْ كُذِّبَتْ رُسُلٌ مِّن قَبْلِكَ فَصَبَرُوا۟ عَلَىٰ مَا كُذِّبُوا۟ وَأُوذُوا۟ حَتَّىٰٓ أَتَىٰهُمْ نَصْرُنَا ۚ وَلَا مُبَدِّلَ لِكَلِمَٰتِ ٱللَّهِ ۚ وَلَقَدْ جَآءَكَ مِن نَّبَإِى۟ ٱلْمُرْسَلِينَ ﴿٣٤﴾

waxaana ku soo gaadhay warkii rasuulladii.

35. Hadday kugu waynaatay (cuslaatay) jeedsigoodu haddaad karto inaad god ka yeelato dhulka ama sallaan samada ood aayad u keentid (samee), hadduu doono Alle na wuxuu ku kulmin lahaa hanuunka ee ha ka mid noqonin jaahiliinta.

وَإِن كَانَ كَبُرَ عَلَيْكَ إِعْرَاضُهُمْ فَإِنِ ٱسْتَطَعْتَ أَن تَبْتَغِىَ نَفَقًا فِى ٱلْأَرْضِ أَوْ سُلَّمًا فِى ٱلسَّمَآءِ فَتَأْتِيَهُم بِـَٔايَةٍ ۚ وَلَوْ شَآءَ ٱللَّهُ لَجَمَعَهُمْ عَلَى ٱلْهُدَىٰ ۚ فَلَا تَكُونَنَّ مِنَ ٱلْجَٰهِلِينَ ﴿٣٥﴾

36. Waxaa uun ajiibi oggolaan xaqa kuwa maqli, kuwa dhintayse waxaa soo bixin Alle xaggiisaana loo celin.

* إِنَّمَا يَسْتَجِيبُ ٱلَّذِينَ يَسْمَعُونَ ۘ وَٱلْمَوْتَىٰ يَبْعَثُهُمُ ٱللَّهُ ثُمَّ إِلَيْهِ يُرْجَعُونَ ﴿٣٦﴾

37. Waxay dhaheen maxaa loogu soo dejin waayey «mucjisad» aayad xagga Allehiis, waxaad dhahdaa Alle waa karaa inuu soo dejiyo aayad badankoodse ma oga.

وَقَالُوا۟ لَوْلَا نُزِّلَ عَلَيْهِ ءَايَةٌ مِّن رَّبِّهِۦ ۚ قُلْ إِنَّ ٱللَّهَ قَادِرٌ عَلَىٰٓ أَن يُنَزِّلَ ءَايَةً وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٣٧﴾

Aayadahan sida aayado kale oo ku badan quraanka waa samirsiin Nabiga iyo calool adkaysiin, wuxuuna Alle u yaboohay gargaar, saas darteed waa inuu Nabigu iska fududeeyo xaalkooda, illeen dhulka intuu godad ka jeexdo ama cirka sallaan ugu koro uma keeni karo aayade, awooddana Alle ayaa iska leh, hadduu doonana wuxuu dadka ku kulmin hanuunka ee ha ka mid noqonin kuwaan wax ogayn yuu Alle ku yidhi, xaqana waxaa maqla kuwa qalbigoodu nool yahay, gaalo qalbiga ka dhimatayse wax ma maqlaan, waxaase loo soo kulmin qiyaamaha, waxayna codsan jireen aayad loo soo dejiyo, Alle na wuu karaa soo dejinteeda badankoodse wax ma oga.

Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: wuxuu jeclaa Nabigu in dadka dhammaan xaqa rumeeyaan, Alle ayaase u warramay inuu rumeyn uun ruuxuu Alle doono oo toosiyo. **[Al-Ancaam: 34-37].**

38. Wax ku socda dhulka ama shimbir ku duuli garbihiisa oo dhan waa umado idinla mid ah, waxba kagama aanan tagin kitaabka, waxaana loo soo kulmin dadka xagga Rabbigood.

وَمَا مِن دَآبَّةٍ فِى ٱلْأَرْضِ وَلَا طَٰٓئِرٍ يَطِيرُ بِجَنَاحَيْهِ إِلَّآ أُمَمٌ أَمْثَالُكُم ۚ مَّا فَرَّطْنَا فِى ٱلْكِتَٰبِ مِن شَىْءٍ ۚ ثُمَّ إِلَىٰ رَبِّهِمْ يُحْشَرُونَ ﴿٣٨﴾

39. Kuwa beeniyey aayadkanaga waa dhaga la'yihiin oo af la'yihiin mugdibayna ku sugan yihiin, cidduu doono wuu dhumiyaa Alle tuu doonana wuxuu yeelaa jid toosan.

وَٱلَّذِينَ كَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِنَا صُمٌّ وَبُكۡمٞ فِي ٱلظُّلُمَٰتِۗ مَن يَشَإِ ٱللَّهُ يُضۡلِلۡهُ وَمَن يَشَأۡ يَجۡعَلۡهُ عَلَىٰ صِرَٰطٖ مُّسۡتَقِيمٖ ٣٩

40. Waxaad dhahdaa bal ka warrama hadduu idiin yimaaddo cadaabka Alle ama idiin timaaddo saacaddu (qiyaame) wax Alle kasoo hadhay miyaad baryeysaan haddaad run sheegaysaan.

قُلۡ أَرَءَيۡتَكُمۡ إِنۡ أَتَىٰكُمۡ عَذَابُ ٱللَّهِ أَوۡ أَتَتۡكُمُ ٱلسَّاعَةُ أَغَيۡرَ ٱللَّهِ تَدۡعُونَ إِن كُنتُمۡ صَٰدِقِينَ ٤٠

41. Isaga unbaana baryeysaan oo faydi waxaad ka baryeysaan hadduu doono, waadna halmaamaysaan waxaad la wadaajinaysaan.

بَلۡ إِيَّاهُ تَدۡعُونَ فَيَكۡشِفُ مَا تَدۡعُونَ إِلَيۡهِ إِن شَآءَ وَتَنسَوۡنَ مَا تُشۡرِكُونَ ٤١

Abuurka Alle waa badan yahay, kitaabkiisana wax kasta oo wax anfaca wuu ku sheegay, cid walbana waa la horkeeni Alle, waxaana sugnaaday in la soo kulmin xayawaanka oo loo qisaasi midda geeska leh tii seenyada ahayd oy hardiday, gaalada xaqa diidanna waa wax dhago la' oo afla' oo mugdi ku jira, cidduu doonana Alle wuu hanuunin, tuu doonana wuu dhumin. Marka gaalada cadaabka Alle u yimaaddo ama qiyaamadu waxaan isaga ahayn ma baryaan, isaga unbaana fayda dhibka hadduu doono, waana la halmaami waxa ka soo hadhay oo adduunka lagu caabudi jiray waxna laga dayi jiray, saasayna waajib u tahay in Alle uun la caabudo, sharcigiisana la raaco oo lagu dhaqmo si dhab ah, illeen isagaa jidkii liibaanta iyo guusha ahe, waxa ka soo hadhayna waa khasaare. **[Al-Ancaam: 38-41].**

42. Waxaan u dirray (rasuul) ummado idinka horreeyey waxaanna ku qabannay dhibaato iyo cudur bal inay Alle isu dulleeyaan oo u towbad keenaan (kaligiisna caabudaan oo baryaan).

وَلَقَدۡ أَرۡسَلۡنَآ إِلَىٰٓ أُمَمٖ مِّن قَبۡلِكَ فَأَخَذۡنَٰهُم بِٱلۡبَأۡسَآءِ وَٱلضَّرَّآءِ لَعَلَّهُمۡ يَتَضَرَّعُونَ ٤٢

فَلَوْلَآ إِذْ جَآءَهُم بَأْسُنَا تَضَرَّعُواْ وَلَٰكِن قَسَتْ قُلُوبُهُمْ وَزَيَّنَ لَهُمُ ٱلشَّيْطَٰنُ مَا كَانُواْ يَعْمَلُونَ ﴿٤٣﴾

43. Maa markuu u yimaaddo dhibku ay Alle isu dulleeyaan oo baryaan, waxaase ingagtay quluubtoodii, wuxuuna u qurxiyey shaydaanku waxay falayeen.

فَلَمَّا نَسُواْ مَا ذُكِّرُواْ بِهِۦ فَتَحْنَا عَلَيْهِمْ أَبْوَٰبَ كُلِّ شَىْءٍ حَتَّىٰٓ إِذَا فَرِحُواْ بِمَآ أُوتُوٓاْ أَخَذْنَٰهُم بَغْتَةً فَإِذَا هُم مُّبْلِسُونَ ﴿٤٤﴾

44. Markay halmaameen (ka jeedsadeen) wixii lagu waaniyey yaan u furray korkooda irridaha wax kasta, markay ku farxaan waxaa la siiyey yaan ku qabannaa kado, markaasay ahaadaan kuwo quusta.

فَقُطِعَ دَابِرُ ٱلْقَوْمِ ٱلَّذِينَ ظَلَمُواْ ۚ وَٱلْحَمْدُ لِلَّهِ رَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٤٥﴾

45. Waxaana la gooyey cidhibta qoomkii dulmiga falay, mahadna Alle ayaa iska leh ah Rabbiga caalamka.

Ilaahay ummado badan oo hore yuu Nabiyo u diray, kuna qaban jiray dhibaato iyo cudur, si ay Alle u xusuustaan, waxaase ingagay qalbigoodii oo shaydaan baa wax u qurxiyey, markay xaqii ka jeedsadeenna waxaa loo furay wax kasta (oo shuqliya), markay ku farxaanna waxa la siiyey waxaan ku qabannaa kado markaasay quustaan, waxaana la cidhib tiray gaaladii, mahadna Alle ayaa iska leh, waxaana habboon in marka Alle wax ku siiyo aad ku aqoonsatid oo ku mahadisid ee ma habboona inaad ku kibirtid ood la boodboodid. Xasan al-Basri wuxuu yidhi: ciddii Alle u waasiciyo rizqiga oon ogaan in la magri, oo la sasabi waa midaan wax garad ahayn. Qataadana wuxuu yidhi: waxaa la halaagaa dadka markay kibraan oy shuqliso nicmadu oy ku sirmaan Alle iyo nicmadiisa waxaana saas noqda cid xaqa ka leexatay. **[Al-Ancaam: 42-45].**

قُلْ أَرَءَيْتُمْ إِنْ أَخَذَ ٱللَّهُ سَمْعَكُمْ وَأَبْصَٰرَكُمْ وَخَتَمَ عَلَىٰ قُلُوبِكُم مَّنْ إِلَٰهٌ غَيْرُ ٱللَّهِ يَأْتِيكُم بِهِۦ ۗ ٱنظُرْ كَيْفَ نُصَرِّفُ ٱلْءَايَٰتِ ثُمَّ هُمْ يَصْدِفُونَ ﴿٤٦﴾

46. Waxaad dhahdaa bal warrama hadduu Alle qabto maqalkiinna iyo araggiinna oo daboolo quluubtiinna, waa ilaahee Allaah ka soo hadhay ee idiin keeni, day sidaan u cel-celinno aayaadka kadibna ay u jeedsanayaan.

47. Waxaad dhahdaa bal warrama hadduu idiinku yimaaddo cadaabka Alle kado ama caddaan miyaa la halaagaa waxaan qoomka daalimiinta ahayn.

قُلْ أَرَءَيْتَكُمْ إِنْ أَتَىٰكُمْ عَذَابُ ٱللَّهِ بَغْتَةً أَوْ جَهْرَةً هَلْ يُهْلَكُ إِلَّا ٱلْقَوْمُ ٱلظَّٰلِمُونَ ﴿٤٧﴾

48. Rasuullada waxaan u dirraa inay bishaareeyaan oo digaan, ciddii rumaysa xaqa oo wanaajiya (camalka) cabsi iyo murug midna ma saarro.

وَمَا نُرْسِلُ ٱلْمُرْسَلِينَ إِلَّا مُبَشِّرِينَ وَمُنذِرِينَ ۖ فَمَنْ ءَامَنَ وَأَصْلَحَ فَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿٤٨﴾

49. Kuwa beeniyey aayaadkannaga waxaa taaban cadaab faasiqnimadooda darteed.

وَٱلَّذِينَ كَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا يَمَسُّهُمُ ٱلْعَذَابُ بِمَا كَانُوا۟ يَفْسُقُونَ ﴿٤٩﴾

Hadduu Alle ka qaado ruuxa nicmada, maqalka ama aragga ama qalbiga daboolo cidaan Alle ahayn oo u keeni karta ma jirto, Alle na xaquu soo celceliyaa si loogu waano qaato, gaaladuse way ka jeedsan xaqa, wax cadaabka Alle celin karana ma jiro ama kado ha ku yimaaddo ama si caddaanaba, daalimiinta umbaana la halaagi, rasuulladuna waa bishaareeyayaal diga, ciddii xaqa rumaysa oo camalka wanaajisana cabsi iyo murug midna ma aragto, kuwa beeniya aayaadka Alle na waxaa taaban cadaab faasiqnimadooda darteed, ujeeddaduna waxaa weeye in Alle cid la wadaagta awoodda ayna jirin, xaqana uu caddeeyey, Nabiyana diray, xaq-beeniyana uu halaagi. **[Al-Ancaam: 46-49].**

50. Waxaad dhahdaa ma dhahayo waxaa agtayda ah khasnadaha Alle, waxa maqanna ma ogi, mana dhahayo waxaan ahay malag, waxaan uun raaci wixii lay waxyoodo, waxaad dhahdaa ma eg yhiin indhoole iyo arke, miyeydaan fikirayn.

قُل لَّآ أَقُولُ لَكُمْ عِندِى خَزَآئِنُ ٱللَّهِ وَلَآ أَعْلَمُ ٱلْغَيْبَ وَلَآ أَقُولُ لَكُمْ إِنِّى مَلَكٌ ۖ إِنْ أَتَّبِعُ إِلَّا مَا يُوحَىٰٓ إِلَىَّ ۚ قُلْ هَلْ يَسْتَوِى ٱلْأَعْمَىٰ وَٱلْبَصِيرُ ۚ أَفَلَا تَتَفَكَّرُونَ ﴿٥٠﴾

51. Ugu dig quraanka kuwa ka cabsan in loo soo kulmiyo Rabbigood iyagoon lahayn sokaydiis ku u dhow oo jecel

وَأَنذِرْ بِهِ ٱلَّذِينَ يَخَافُونَ أَن يُحْشَرُوٓا۟ إِلَىٰ رَبِّهِمْ لَيْسَ لَهُم مِّن دُونِهِۦ وَلِىٌّ وَلَا شَفِيعٌ لَّعَلَّهُمْ يَتَّقُونَ ﴿٥١﴾

iyo shafeece midna, inay dhawrsadaan darteed.

52. Hana eryin kuwa baryi Rabbigood aroor iyo galabba iyagoo dooni wajigiisa, waxba kaama saarra xisaabtooda iyana xisaabtaada waxba kama saarra, oo haddaad eridiina aad ka mid noqotid daalimiinta.

وَلَا تَطۡرُدِ ٱلَّذِينَ يَدۡعُونَ رَبَّهُم بِٱلۡغَدَوٰةِ وَٱلۡعَشِيِّ يُرِيدُونَ وَجۡهَهُۥۖ مَا عَلَيۡكَ مِنۡ حِسَابِهِم مِّن شَيۡءٖ وَمَا مِنۡ حِسَابِكَ عَلَيۡهِم مِّن شَيۡءٖ فَتَطۡرُدَهُمۡ فَتَكُونَ مِنَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٥٢﴾

Wuxuu Alle faray Nabiga inuu u sheego dadka inuusan hananin khasnadda Alle, waxa maqanna ogayn, malagna ahayn, ee uu raaci uun xaqa loo waxyooday, mana sinna indhoole iyo wax arke, waana in wax la fiiriyo si xaqa loo rumeeyo, quraanka yuuna Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ugu digi jiray dadka ka cabsan in Alle loo soo kulmiyo iyagoon heleyn gargaare iyo shafeece isaga ka soo hadhay, bal inay dhawrsadaan, wuxuuna Alle ka reebay Nabiga inuu eryo kuwa Alle caabudi had iyo jeer iyagoo dooni wajigiisa, illeen xisaabtooda ma saarra korkiisee, xisaabtiisana ma saarra korkoodee, hadduu fogeeyana uu noqon mid xaqa ka leexday, Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) waa ka fog yahay inuu fogeeyo kuwa xaqa rumeeyey ee waxaa lagu quusin gaalada doonaysa inay isku dayaan inay kala fogeeyaan Nabiga iyo mu'miniinta, aayaduna waxay soo degtay mar Nabiga ay la joogeen Suhayl, Bilaal iyo Cammaar oo gaaladii Qureesheed ku dhaheen Nabiga ma kuwanaa Alle naga doortay, iska eri aan ku raacnee. **[Al-Ancaam: 50-52].**

53. Saasaan isugu imtixaannay (dadka) qaarkood qaarka kale inay dhahaan ma kuwanaa Alle ku mannaystay (islaamka) dhexdannada, miyuusan Alle ahayn kan og kuwa ku mahdiya.

وَكَذَٰلِكَ فَتَنَّا بَعۡضَهُم بِبَعۡضٖ لِّيَقُولُوٓاْ أَهَٰٓؤُلَآءِ مَنَّ ٱللَّهُ عَلَيۡهِم مِّنۢ بَيۡنِنَآۗ أَلَيۡسَ ٱللَّهُ بِأَعۡلَمَ بِٱلشَّٰكِرِينَ ﴿٥٣﴾

54. Markay kuu yimaadaan kuwa rumeeyey aayaadkannaga waxaad dhahdaa salaamu calaykum (waad salaaman tihiin), wuxuu Alle isa saaray naxariis, oo ah ciddii idinka mid ah oo fasha xumaan isagoo ka jaahil ah oo toobad keena oo

وَإِذَا جَآءَكَ ٱلَّذِينَ يُؤۡمِنُونَ بِـَٔايَٰتِنَا فَقُلۡ سَلَٰمٌ عَلَيۡكُمۡ كَتَبَ رَبُّكُمۡ عَلَىٰ نَفۡسِهِ ٱلرَّحۡمَةَ أَنَّهُۥ مَنۡ عَمِلَ مِنكُمۡ سُوٓءَۢا بِجَهَٰلَةٖ ثُمَّ تَابَ مِنۢ بَعۡدِهِۦ وَأَصۡلَحَ فَأَنَّهُۥ غَفُورٞ رَّحِيمٞ ﴿٥٤﴾

wanaajiya, Alle ayaa u dhaafi una naxariisan.

55. Saasaannu u kala bixinnaa aayaadka si uu u caddaado jidka dambilayaasha.

وَكَذَٰلِكَ نُفَصِّلُ ٱلْـَٔايَـٰتِ وَلِتَسْتَبِينَ سَبِيلُ ٱلْمُجْرِمِينَ ﴿٥٥﴾

Adduunku waa guri imtixaan, dadkana waa laysku imtixaanay, siday gaaladii Qureesheed u xaqiri jireen, ma kuwanaa Alle naga doortay oo hanuuniyey, Alle ayaase og cidda ku mahdisa, wuxuuna Alle faray Nabiga in hadday u yimaadaan kuwa xaqa rumeeyey uu salaamo, soona dhaweeyo, wuxuuna u yaboohay ciddii gafta isagoon ogayn oo hadddana toobad keenta wanaaggana fasha in Alle u naxariisan una dambi dhaafi, Alle na xaqa wuu qeexay si uu u caddaado jidka dambiilayaashu, gaalada iyo kuwaan wax kasayn had iyo jeer waxay qiimo dheeraada siiyaan xoolaha, madaxtinimada iyo carruurta, iyagoo qiyaasi in cidda wax haysata ay mudan tahay hanuunka, taasina waa fikrad xun oo khalada, cidda xoolaha haysata kama sarreeyso kan saboolka ah, waxaase lagu kala sarreeyaa akhlaaqda, wanaag falka, Alle ka yaabidda iyo raacidda xaqa. **[Al-Ancaam: 53-55].**

56. Waxaad dhahdaa waxaa layga reebay inaan caabudo waxaad caabudaysaan oo Alle ka soo hadhay, waxaad dhahdaa raaci maayo hawadiinna oon dhumo markaas, kana mid noqon waayo kuwa hanuunsan.

قُلْ إِنِّى نُهِيتُ أَنْ أَعْبُدَ ٱلَّذِينَ تَدْعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ ۚ قُل لَّآ أَتَّبِعُ أَهْوَآءَكُمْ قَدْ ضَلَلْتُ إِذًا وَمَآ أَنَا۠ مِنَ ٱلْمُهْتَدِينَ ﴿٥٦﴾

57. Waxaad dhahdaa waxaan ku sugnahay xujo Rabbigay waadna beeniseen xaqaas, agtayda ma aha waxaad dadajisanaysaan, xukunkana Alle ayaa iska leh, xaquuna sheegaa, isagaana u kheyr badan kuwa wax kala xukmiya.

قُلْ إِنِّى عَلَىٰ بَيِّنَةٍ مِّن رَّبِّى وَكَذَّبْتُم بِهِۦ ۚ مَا عِندِى مَا تَسْتَعْجِلُونَ بِهِۦٓ ۚ إِنِ ٱلْحُكْمُ إِلَّا لِلَّهِ ۖ يَقُصُّ ٱلْحَقَّ ۖ وَهُوَ خَيْرُ ٱلْفَـٰصِلِينَ ﴿٥٧﴾

58. Waxaad dhahdaa hadduu yahay agtayda waxaad dedejisanaysaan (ciqaabta) waxaa la kala xukumi lahaa dhexdeenna, Alle na waa og yahay daalimiinta.

قُل لَّوْ أَنَّ عِندِى مَا تَسْتَعْجِلُونَ بِهِۦ لَقُضِىَ ٱلْأَمْرُ بَيْنِى وَبَيْنَكُمْ ۗ وَٱللَّهُ أَعْلَمُ بِٱلظَّـٰلِمِينَ ﴿٥٨﴾

59. Alle agtiisa waxaa ah furaha waxa maqan, wax og oon isaga ahaynna ma jiro, wuxuuna og yahay waxa barriga iyo badda ku sugan, wixii caleena oo dhacdana wuu og yahay, xabbad midha ah oo mugdiga dhulka ku sugan iyo wixii qoyan ama engagan waxay ku sugan yihiin kitaab cad.

* وَعِندَهُۥ مَفَاتِحُ ٱلْغَيْبِ لَا يَعْلَمُهَآ إِلَّا هُوَ ۚ وَيَعْلَمُ مَا فِى ٱلْبَرِّ وَٱلْبَحْرِ ۚ وَمَا تَسْقُطُ مِن وَرَقَةٍ إِلَّا يَعْلَمُهَا وَلَا حَبَّةٍ فِى ظُلُمَٰتِ ٱلْأَرْضِ وَلَا رَطْبٍ وَلَا يَابِسٍ إِلَّا فِى كِتَٰبٍ مُّبِينٍ ﴿٥٩﴾

Alle ayaa mudan cibaadada, gaalada hawadeeda ciddii raacdana way dhumi, Nabiguna wuxuu ku sugan yahay xujo cad oo Alle; gaaladuna way beeniyeen xaqii, Nabigana waxaa saaran gaadhsiin, Alle ayaana xaqa kala xukuma, ciqaabna waxaa hanta Alle, isagaana og daalimiinta, isagaana og waxa ku maqan, barri iyo badba. **[Al-Ancaam: 56-59].**

60. Alle waa kan idin oofsada habeenkii ogna waxaad fashaan maalintii, markaasna idin soo bixiya in la xukumo ajal magacaaban darteed, xaggiisaana laydiin celin, markaasuu idiinka warrami waxaad falaysaan.

وَهُوَ ٱلَّذِى يَتَوَفَّىٰكُم بِٱلَّيْلِ وَيَعْلَمُ مَا جَرَحْتُم بِٱلنَّهَارِ ثُمَّ يَبْعَثُكُمْ فِيهِ لِيُقْضَىٰٓ أَجَلٌ مُّسَمًّى ۖ ثُمَّ إِلَيْهِ مَرْجِعُكُمْ ثُمَّ يُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٦٠﴾

61. Alle waa kan khalqigiisa ka gaaliba, kana sarreeya addoomadiisa, wuxuuna idiin soo diraa malaa'ig idin ilaalisa, waxaad samaynaysaanna qora, markuu u yimaaddo midkiin mawdku waxaa oofsata «disha» malaa'igtannada, mana gabood falaan.

وَهُوَ ٱلْقَاهِرُ فَوْقَ عِبَادِهِۦ ۖ وَيُرْسِلُ عَلَيْكُمْ حَفَظَةً حَتَّىٰٓ إِذَا جَآءَ أَحَدَكُمُ ٱلْمَوْتُ تَوَفَّتْهُ رُسُلُنَا وَهُمْ لَا يُفَرِّطُونَ ﴿٦١﴾

62. Markaasaa loo celin dadka xagga sayidkooda xaqa ah, isagaana leh xukunka dedejiyana xisaabta.

ثُمَّ رُدُّوٓا۟ إِلَى ٱللَّهِ مَوْلَىٰهُمُ ٱلْحَقِّ ۚ أَلَا لَهُ ٱلْحُكْمُ وَهُوَ أَسْرَعُ ٱلْحَٰسِبِينَ ﴿٦٢﴾

Alle waa kan dadka oofsada habeenkii markay hurdaan, ogna waxay fali maalintii, muddo magacaabanna sameeyey, xaggiisaana loo noqon, ugana warrami waxay faleen, waana kan wax walba u khushuucaan oo ka sarreeya, malaa'ig nafta qaaddana u soo dira dadka oon gabood falayn, dadkuna xaggiisa u noqon, sayid xaq ahna ah, xukunkana iska leh, xisaabtiisuna degdegayso. Waxaa sugnaatay in marka la dhiman malaa'igtu u bishaarayn nafta fiican, canaananna midda xun, saas darteed waa in loo diyaar garoobo, Alle na la warsado xaq ku sugnaan iyo wanaag. **[Al-Ancaam: 60-62].**

قُلْ مَن يُنَجِّيكُم مِّن ظُلُمَٰتِ ٱلْبَرِّ وَٱلْبَحْرِ تَدْعُونَهُۥ تَضَرُّعًا وَخُفْيَةً لَّئِنْ أَنجَىٰنَا مِنْ هَٰذِهِۦ لَنَكُونَنَّ مِنَ ٱلشَّٰكِرِينَ ﴿٦٣﴾

63. Waxaad dhahdaa yaa idinka koriya mugdiga barriga iyo badda ood u baridaan isdullayn iyo qarsoodi, idinkoo dhihi hadduu naga koriyo tan waxaan ka mid noqonaynaa kuwa mahadiya.

قُلِ ٱللَّهُ يُنَجِّيكُم مِّنْهَا وَمِن كُلِّ كَرْبٍ ثُمَّ أَنتُمْ تُشْرِكُونَ ﴿٦٤﴾

64. Waxaad dhahdaa Alle ayaa idinka koriya taas iyo shiddo kasta, markaasaad u shariig yeeshaan.

قُلْ هُوَ ٱلْقَادِرُ عَلَىٰٓ أَن يَبْعَثَ عَلَيْكُمْ عَذَابًا مِّن فَوْقِكُمْ أَوْ مِن تَحْتِ أَرْجُلِكُمْ أَوْ يَلْبِسَكُمْ شِيَعًا وَيُذِيقَ بَعْضَكُم بَأْسَ بَعْضٍ ۗ ٱنظُرْ كَيْفَ نُصَرِّفُ ٱلْءَايَٰتِ لَعَلَّهُمْ يَفْقَهُونَ ﴿٦٥﴾

65. Waxaad dhahdaa Alle waa kan kara inuu idinku soo daayo cadaab korkiinna ama lugihiinna hoostooda ama idin qaso (oo idinka yeelo) kooxo uu dhadhansiiyo qaarkood qaarka kale dhibkiisa, bal day sidaan ugu caddaynaynno aayaadka, bal inay kasaan.

Alle ayaa dadka ka koriya mugdiga barriga iyo baddaba, oyna baryaan dadku inuu ka koriyo dhibka, isagaana ka koriya shiddo oo dhan, hadana ay u shariig yeeli, karana inuu cadaab korka ama hoosta kaga soo daayo, ama kooxo is laaya ka yeelo, xaqana caddeeya si wax loo fahmo, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: waxaan warsaday Rabbigay saddex: waxaan warsaday inuusan umaddayda ku halaagin maanshayn, wuuna i siiyey, waxaana warsaday inuusan umaddayda ku halaagin abaar, wuuna i siiyey, waxaana warsaday inuusan dhexdooda yeelin dagaal wuuna ii diiday. Waxaa wariyey Muslim. **[Al-Ancaam: 63-65].**

وَكَذَّبَ بِهِۦ قَوْمُكَ وَهُوَ ٱلْحَقُّ ۚ قُل لَّسْتُ عَلَيْكُم بِوَكِيلٍ ﴿٦٦﴾

66. Waxaa beeniyey (quraanka) qoomkaagii isagoo xaq ah, waxaad dhahdaa kama ahi korkiinna wakiil (ilaaliye).

لِّكُلِّ نَبَإٍ مُّسْتَقَرٌّ ۚ وَسَوْفَ تَعْلَمُونَ ﴿٦٧﴾

67. War kasta meel uu ku sugnaado yuu leeyahay waadna ogaan doontaan.

وَإِذَا رَأَيْتَ ٱلَّذِينَ يَخُوضُونَ فِىٓ ءَايَٰتِنَا فَأَعْرِضْ عَنْهُمْ حَتَّىٰ يَخُوضُوا۟ فِى حَدِيثٍ غَيْرِهِۦ ۚ وَإِمَّا يُنسِيَنَّكَ ٱلشَّيْطَٰنُ فَلَا تَقْعُدْ بَعْدَ ٱلذِّكْرَىٰ مَعَ ٱلْقَوْمِ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٦٨﴾

68. Markaad aragto kuwa dhumban aayaadkannaga, isaga jeedso intay ka dhumbadaan sheeko kale, haddduu ku halmaansiiyo shaydaanna ha la fadhiyin xusuusta ka dib daalimiinta.

وَمَا عَلَى ٱلَّذِينَ يَتَّقُونَ مِنْ حِسَابِهِم مِّن شَىْءٍ وَلَٰكِن ذِكْرَىٰ لَعَلَّهُمْ يَتَّقُونَ ﴿٦٩﴾

69. Kuwa dhawrsoonna xisaabtooda waxba kama saarra, laakiin waa waano, bal inay dhawrsadaan.

Quraanka waxaa beeniyey gaaladii makaad isagoo xaq ah, Nabiguse ilaaliye qasbi ma ahayn, illeen wax kastaba waqtiyuu leeyahay la ogaan doonee, waa in marka lala kulmo cid wax ka sheegi quraanka iyo xaqa aan lala fadhiisan intay iska dayso xaalkaas, hadduu shaydaan ku halmaansiiyana waa inaan lala sii fadhiyin daalimiinta, ciddii dhuntana xil kama saarra cidda dhawrsoon, waxaase laga rabaa waano iyo wax u sheegid uun. Aayaduhuna waxay caddayn in xaqu muuqdo, ciddii diidda oo ceebeyn xaqana aan lala fadhiisan ee laga fogaado, wax dhib ahna kaama saarra ciddii diidda xaqa, haddaad dhawrsato ood Alle ka yaabtid. **[Al-Ancaam: 66-69].**

وَذَرِ ٱلَّذِينَ ٱتَّخَذُوا۟ دِينَهُمْ لَعِبًا وَلَهْوًا وَغَرَّتْهُمُ ٱلْحَيَوٰةُ ٱلدُّنْيَا ۚ وَذَكِّرْ بِهِۦٓ أَن تُبْسَلَ نَفْسٌۢ بِمَا كَسَبَتْ لَيْسَ لَهَا مِن دُونِ ٱللَّهِ وَلِىٌّ وَلَا شَفِيعٌ وَإِن تَعْدِلْ كُلَّ عَدْلٍ لَّا يُؤْخَذْ مِنْهَآ ۗ أُو۟لَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ أُبْسِلُوا۟ بِمَا كَسَبُوا۟ ۖ لَهُمْ شَرَابٌ مِّنْ حَمِيمٍ وَعَذَابٌ أَلِيمٌۢ بِمَا كَانُوا۟ يَكْفُرُونَ ﴿٧٠﴾

70. Iskaga tag kuwa ka yeeshay diintooda ciyaar iyo madaddaalo kuna kadsoomay nolosha dhaw xusuusina intaan laga abaalmarinin (loo xabisin) nafi waxay kasbatay iyadoon lahayn Alle ka sokow wali «sokeeye jecel» iyo shafeece midna, hadday isku furato furasho oo dhanna lagama qaado, kuwaasu

waa kuwa loo dhiibay (halaag) waxay kasbadeen dartiis, waxayna mudan cabbid kulul iyo cadaab daran, gaalnimadooda darteed.

71. Waxaad dhahdaa ma waxaan caabudaynaa Alle ka sokow waxaan na anfacayn nana dhibayn oo dib naloogu celin (gaalnimo) inta Alle na hanuuniyey ka dib, sida kan ay ku wareerisay (dhumisay) shayaadiintu dhulka isagoo leh saaxiibbo ugu yeedhi hanuunka oo ku leh noo kaalay, waxaad dhahdaa hanuunka Alle unbaa hanuun ah, waxaana nala faray inaan u hoggaansanno Rabbiga caalamka.

قُلْ أَنَدْعُواْ مِن دُونِ ٱللَّهِ مَا لَا يَنفَعُنَا وَلَا يَضُرُّنَا وَنُرَدُّ عَلَىٰٓ أَعْقَٰبِنَا بَعْدَ إِذْ هَدَىٰنَا ٱللَّهُ كَٱلَّذِى ٱسْتَهْوَتْهُ ٱلشَّيَٰطِينُ فِى ٱلْأَرْضِ حَيْرَانَ لَهُۥٓ أَصْحَٰبٌ يَدْعُونَهُۥٓ إِلَى ٱلْهُدَى ٱئْتِنَا ۗ قُلْ إِنَّ هُدَى ٱللَّهِ هُوَ ٱلْهُدَىٰ ۖ وَأُمِرْنَا لِنُسْلِمَ لِرَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٧١﴾

Ciddii xaqa ka jeedsata oo diintiisa ka yeesha ciyaar oo adduunyadu khaladdo waa in layskaga tago, oon lagu waqti seegin, mar haddii loo caddeeyey xaqa iyo in naf walba loo xidhi camalkeeda iyadoon gargaare iyo shafeece helayn, wax is furasha ahna aan laga aqbalayn, waana kuwa loo ciqaabi camalkoodii xumaa dartiis, mudanna cabbid kulul iyo cadaab daran, gaalnimadoodii xumayd darteed, saas darteed waa in Alle kaliya la caabudo, lagana leexdo waddada shaydaanka dadka baadiyeeya, oo hanuunka ka leexiya. **[Al-Ancaam: 70-71].**

72. Oogana salaadda kana dhawrsada Alle waa kan xaggiisa laydiin soo kulmine.

وَأَنْ أَقِيمُواْ ٱلصَّلَوٰةَ وَٱتَّقُوهُ ۚ وَهُوَ ٱلَّذِىٓ إِلَيْهِ تُحْشَرُونَ ﴿٧٢﴾

73. Allana waa ka ku abuuray samooyinka iyo dhulka xaq, maalinta uu dhihi ahow wuu ahaan (waxaasu), hadalkiisu waa xaq, wuxuuna leeyahay xukunka maalinta la afuufi suurka, waana og yahay wax maqan (la arkayn)

وَهُوَ ٱلَّذِى خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ بِٱلْحَقِّ ۖ وَيَوْمَ يَقُولُ كُن فَيَكُونُ ۚ قَوْلُهُ ٱلْحَقُّ ۚ وَلَهُ ٱلْمُلْكُ يَوْمَ يُنفَخُ فِى ٱلصُّورِ ۚ عَٰلِمُ ٱلْغَيْبِ وَٱلشَّهَٰدَةِ ۚ وَهُوَ ٱلْحَكِيمُ ٱلْخَبِيرُ ﴿٧٣﴾

iyo waxa joogaba, waana falsame xeel dheer.

Waxaa la faray inay hoggaansamaan oogaanna salaadda, kana dhawrsadaan Alle, illeen isagaa xaggiisa loo kulmine, Alle na waa kan samooyinka iyo dhulka xaq u abuuray, wuxuu amraana isla markaasba ahaan, hadalkiisuna xaq yahay, xukunkana iska leeyahay maalinta suurka qiyaame la afuufi, og yahayna wax kasta, falna san yahay ogaanshihiisuna xeel dheer yahay. Saas darteed waa in loo diyaargaroobaa maalintaas wayn ee lays abaal marin, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Israafiil wuxuu afka saaray suurka wajigiisana wuu leexiyey isagoo sugi marka la fari inuu afuufo. Waxaa wariyey (Imaam Muslim). **[Al-Ancaam: 72-73].**

74. Ka warran markuu ku yidhi (Nabi) Ibraahim aabihiis aazara ma waxaad ka yeelan sanamyo ilaahyo, waxaan kugu arkaa adiga iyo qoomkaagaba baadi cad.

* وَإِذْ قَالَ إِبْرَٰهِيمُ لِأَبِيهِ ءَازَرَ أَتَتَّخِذُ أَصْنَامًا ءَالِهَةً إِنِّيٓ أَرَىٰكَ وَقَوْمَكَ فِي ضَلَٰلٍ مُّبِينٍ ﴿٧٤﴾

75. Saasaan u tusinnay Ibraahim xukunka samooyinka iyo dhulka si uu uga mid noqdo kuwa yaqiiniya (xaqa).

وَكَذَٰلِكَ نُرِيٓ إِبْرَٰهِيمَ مَلَكُوتَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَلِيَكُونَ مِنَ ٱلْمُوقِنِينَ ﴿٧٥﴾

76. Markuu ku madoobaaday habeenku wuxuu arkay xiddig wuxuuna yidhi kani waa rabbigay, markuu dhacay wuxuu yidhi ma jecli kuwa dhaca.

فَلَمَّا جَنَّ عَلَيْهِ ٱلَّيْلُ رَءَا كَوْكَبًا ۖ قَالَ هَٰذَا رَبِّي ۖ فَلَمَّآ أَفَلَ قَالَ لَآ أُحِبُّ ٱلْآفِلِينَ ﴿٧٦﴾

77. Markuu arkay dayaxa oo soo muuqda wuxuu yidhi kani waa rabbigay, markuu dhacay wuxuu yidhi hadduusan i hanuunin Rabbigay waxaan ka mid noqon kuwa dhuma.

فَلَمَّا رَءَا ٱلْقَمَرَ بَازِغًا قَالَ هَٰذَا رَبِّي ۖ فَلَمَّآ أَفَلَ قَالَ لَئِن لَّمْ يَهْدِنِي رَبِّي لَأَكُونَنَّ مِنَ ٱلْقَوْمِ ٱلضَّآلِّينَ ﴿٧٧﴾

78. Markuu arkay qorraxda oo soo muuqata wuxuu yidhi kani waa rabbigay, kanaa wayne, markay dhacday wuxuu yidhi

فَلَمَّا رَءَا ٱلشَّمْسَ بَازِغَةً قَالَ هَٰذَا رَبِّي هَٰذَآ أَكْبَرُ ۖ فَلَمَّآ أَفَلَتْ قَالَ يَٰقَوْمِ إِنِّي بَرِيٓءٌ مِّمَّا تُشْرِكُونَ ﴿٧٨﴾

qoomkayow beri baan ka ahay waxaad la wadaajinaysaan (Alle).

79. Anugu waxaan u jeediyey wajigayga Allaha abuuray samooyinka iyo dhulka anoo toosan oon ka mid ahayn gaalada.

إِنِّي وَجَّهْتُ وَجْهِيَ لِلَّذِي فَطَرَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ حَنِيفًا ۖ وَمَآ أَنَا۠ مِنَ ٱلْمُشْرِكِينَ ﴿٧٩﴾

Nabi Ibraahim wuxuu u digay aabihiis iyo qoomkiisiiba, wuxuuna ka reebay inay caabudaan sanamyo, illeen Alle ayaa Nabi Ibraahim tusiyey aayaadkiisa si uu uga mid noqdo kuwa xaqa yaqiinsan, wuxuuna qoomkiisii u sheegay in xiddigaha, dayaxa iyo qorraxdaba ayan mudnayn in la caabudo, ee caabudidda xaqa ah Alle kali ah mudan yahay, wuxuuna u caddeeyey qoomkaas inuu beri ka yahay waxay caabudi oo Alle ka soo hadhay, uuna u jeedsaday xagga Allaha xaqa ah, ee abuuray cirka iyo dhulka, taasina waxay ina tusin ku sugnaanta xaqa iyo in qaraabanimadu tahay islaamnimda iyo diinta, waxa ka soo hadhayna uusan wax ahayn haddii diin la'aan la noqdo.

Nabi Ibraahimna wuxuu uga dan lahaa xiddigaha, dayaxa iyo qorraxda inuu tusiyo gaalada in waxay caabudi uusan wax ka jirin, maxaa yeelay waa wax doorsoomi oo dhici oo soo bixi, mase ahayn Nabi Ibraahim mid wax shakiyey. **[Al-Ancaam; 74-79].**

80. Way la doodeen Nabi Ibraahim qoomkiisii, wuxuuna yidhi ma waxaad igula doodaysaan Alle, isagoo hanuuniyey, oonan ka cabsanayn waxaad la wadaajinaysaan, in Rabbigay wax doono mooyee, Rabbigay waa u waasac (awood leeyahay) wax kasto xag ogaansho, miyeydaan xusuusanayn (wax).

وَحَآجَّهُۥ قَوْمُهُۥ ۚ قَالَ أَتُحَٰٓجُّوٓنِّي فِي ٱللَّهِ وَقَدْ هَدَىٰنِ ۚ وَلَآ أَخَافُ مَا تُشْرِكُونَ بِهِۦٓ إِلَّآ أَن يَشَآءَ رَبِّي شَيْـًٔا ۗ وَسِعَ رَبِّي كُلَّ شَىْءٍ عِلْمًا ۗ أَفَلَا تَتَذَكَّرُونَ ﴿٨٠﴾

81. Sideen uga cabsan waxaad la wadaajiseen, idinkuna aydaan ka cabsanayn inaad la wadaajiseen Alle wuxuusan u soo dejinin xujo, ee labada kooxood

وَكَيْفَ أَخَافُ مَآ أَشْرَكْتُمْ وَلَا تَخَافُونَ أَنَّكُمْ أَشْرَكْتُم بِٱللَّهِ مَا لَمْ يُنَزِّلْ بِهِۦ عَلَيْكُمْ سُلْطَٰنًا ۚ فَأَىُّ ٱلْفَرِيقَيْنِ أَحَقُّ بِٱلْأَمْنِ ۖ إِن كُنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿٨١﴾

(muslimka iyo gaalada) koodee mudan nabdagalyo haddaad wax og tihiin.

82. Kuwa xaqa rumeeyey oon ku dheehin iimaankooda dulmi (gaalnimo) kuwaasaa nabadgalyo u sugnaatay hanuunsanna.

ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَلَمۡ يَلۡبِسُوٓاْ إِيمَٰنَهُم بِظُلۡمٍ أُوْلَٰٓئِكَ لَهُمُ ٱلۡأَمۡنُ وَهُم مُّهۡتَدُونَ ﴿٨٢﴾

83. Taasina waa xujadannadii aan Ibraahim ka siinnay qoomkiisa, waxaan kor yeellaa darajaadka ciddaan doonno, Rabbigaana waa falsame oge ah.

وَتِلۡكَ حُجَّتُنَآ ءَاتَيۡنَٰهَآ إِبۡرَٰهِيمَ عَلَىٰ قَوۡمِهِۦۚ نَرۡفَعُ دَرَجَٰتٖ مَّن نَّشَآءُۗ إِنَّ رَبَّكَ حَكِيمٌ عَلِيمٞ ﴿٨٣﴾

Aayadahan wuxuu Alle ku sheegay inay ku doodeen Nabi Ibraahim iyo qoomkiisii xaalka Alle, una caddeeyey in Alle hanuuniyey uuna ka cabsanayn waxay la wadaajiyeen Alle, Ilaahayna og yahay wax walba, wuxuuna ku yidhi sideen uga cabsan waxaad la wadaajiseen Alle idinkuna aydaan ka cabsanayn inaad Alle la wadaajiseen wuxuusan xujo idiinku soo dejinnin, yaase mudan nabadgalyo labadeenna qolo, haddaad wax garanaysaan, waxaa mudan nabadgalyo oo hanuunsan kuwa rumeeyey xaqa oon ku dheehin imaankooda gaalnimo, waana taas xujaduu Alle siiyey Nabi Ibraahim, wuxuuna kor yeelaa darajaadka cidduu doono waana falsame oge ah, taasina waxay tusin in cidda xaqa ku socota mudan yahay nabadgalyo iyo hanuun iyo inuusan ka cabsan waxay ku cabsi galin. **[Al-Ancaam: 80-83].**

84. (Ibraahim) waxaan siinnay Isxaaq iyo Yacquub, dhammaanna waan hanuuninnay, Nabi Nuuxna waan hanuuninnay waqti hore, waxaana hanuuninnay oo faraciisii ka mid ah: Nabi Daawuud, Sulaymaan, Ayuub, Yuusuf, Muuse iyo Haaruun, saasaanna ku abaal marinnaa samofalayaasha.

وَوَهَبۡنَا لَهُۥٓ إِسۡحَٰقَ وَيَعۡقُوبَۚ كُلّٗا هَدَيۡنَاۚ وَنُوحٗا هَدَيۡنَا مِن قَبۡلُۖ وَمِن ذُرِّيَّتِهِۦ دَاوُۥدَ وَسُلَيۡمَٰنَ وَأَيُّوبَ وَيُوسُفَ وَمُوسَىٰ وَهَٰرُونَۚ وَكَذَٰلِكَ نَجۡزِي ٱلۡمُحۡسِنِينَ ﴿٨٤﴾

85. Iyo Zakariye, Yaxye, Ciise, Ilyaas, dhammaanna waxay ahaayeen kuwo suubban.

وَزَكَرِيَّا وَيَحۡيَىٰ وَعِيسَىٰ وَإِلۡيَاسَۖ كُلّٞ مِّنَ ٱلصَّٰلِحِينَ ﴿٨٥﴾

86. Iyo Ismaaciil, Alyasac, Yuunus, iyo Luud, dhammaanna waxaan ka fadilnay caalamka.

وَإِسْمَٰعِيلَ وَٱلْيَسَعَ وَيُونُسَ وَلُوطًا ۚ وَكُلًّا فَضَّلْنَا عَلَى ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٨٦﴾

87. Iyo aabayaalkood iyo faracoodii iyo walaalahood waana doorannay waana ku hanuuninnay jidka toosan.

وَمِنْ ءَابَآئِهِمْ وَذُرِّيَّٰتِهِمْ وَإِخْوَٰنِهِمْ ۖ وَٱجْتَبَيْنَٰهُمْ وَهَدَيْنَٰهُمْ إِلَىٰ صِرَٰطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿٨٧﴾

88. Kaasi waa hanuunkii Alle wuxuuna ku hanuuniyaa cidduu doono oo ka mid ah addoomadiisa, hadday wax la wadaajiyaan Alle na waxaa ka buri waxay fali jireen.

ذَٰلِكَ هُدَى ٱللَّهِ يَهْدِى بِهِۦ مَن يَشَآءُ مِنْ عِبَادِهِۦ ۚ وَلَوْ أَشْرَكُوا۟ لَحَبِطَ عَنْهُم مَّا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿٨٨﴾

89. Kuwaasu waa kuwaan siinnay kitaabka, xukunka iyo Nabinimada, hadday ka gaaloobaanna kuwaasu «gaalada Makaad» waxaan u wakaalannay qoom aan ka gaaloobayn, (muslimiinta).

أُو۟لَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ ءَاتَيْنَٰهُمُ ٱلْكِتَٰبَ وَٱلْحُكْمَ وَٱلنُّبُوَّةَ ۚ فَإِن يَكْفُرْ بِهَا هَٰٓؤُلَآءِ فَقَدْ وَكَّلْنَا بِهَا قَوْمًا لَّيْسُوا۟ بِهَا بِكَٰفِرِينَ ﴿٨٩﴾

90. Kuwaas (Nabiyada) weeye kuwa Alle hanuuniyey ee hanuunkooda ku dayo, waxaadna dhahdaa idin ma warsanaayo ujuuro, ee waa uun waanada caalamka.

أُو۟لَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ هَدَى ٱللَّهُ ۖ فَبِهُدَىٰهُمُ ٱقْتَدِهْ ۗ قُل لَّآ أَسْـَٔلُكُمْ عَلَيْهِ أَجْرًا ۖ إِنْ هُوَ إِلَّا ذِكْرَىٰ لِلْعَٰلَمِينَ ﴿٩٠﴾

Halkan wuxuu Alle ku sheegi nicmaduu siiyey Nabiyada gaar ahaan inuu siiyey Nabi Ibraahim ilmo isagoo wayn, jidka toosanna ku hanuuniyey dhammaan Nabiyada doortayna Alle, Alle na uga digay inay ka leexdaan jidka toosan haddii kale waxaa buri camalkoodii, waxaana Alle siiyey kutubo, xukun iyo Nabinimo. Hadday gaaladu xaqa diidaanna wuxuu Alle leeyahay dadaan marna ka gaaloobaynin, waana kuwaa Nabiyaduu Alle hanuuniyey ee ha lagu daydo marba hadduu Alle faray arrintaas, wax ujuuro ahna Nabigu kama warsanayo xaqa gaadhsiintiisa, ee waa uun waanada caalamka. **[Al-Ancaam: 84-90].**

وَمَا قَدَرُواْ ٱللَّهَ حَقَّ قَدۡرِهِۦٓ إِذۡ قَالُواْ
مَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ عَلَىٰ بَشَرٖ مِّن شَيۡءٖۗ
قُلۡ مَنۡ أَنزَلَ ٱلۡكِتَٰبَ ٱلَّذِي جَآءَ
بِهِۦ مُوسَىٰ نُورٗا وَهُدٗى لِّلنَّاسِ
تَجۡعَلُونَهُۥ قَرَاطِيسَ تُبۡدُونَهَا وَتُخۡفُونَ
كَثِيرٗاۖ وَعُلِّمۡتُم مَّا لَمۡ تَعۡلَمُوٓاْ أَنتُمۡ
وَلَآ ءَابَآؤُكُمۡۖ قُلِ ٱللَّهُۖ ثُمَّ ذَرۡهُمۡ فِي
خَوۡضِهِمۡ يَلۡعَبُونَ ٩١

91. Mayna waynaynin Alle waynaantiisa xaqa ah, markay dheheen kuma soo dejin Alle dad waxba, waxaad dhahdaa yaa soo dejiyey kitaabkii uu la yimid Nabi Muuse isagoo iftiin ah, hanuunna u ah dadka, ood yeelayseen warqado aad muujisaan, oodna qarisaan wax badan, waxaana laydin baray waxaydaan aqoonin idinka iyo aabayaalkiin, waxaad dhahdaa Alle ayaa (soo dejiyey), markaas isaga tag dhumbashadooda iyagoo ciyaari.

وَهَٰذَا كِتَٰبٌ أَنزَلۡنَٰهُ مُبَارَكٞ مُّصَدِّقُ
ٱلَّذِي بَيۡنَ يَدَيۡهِ وَلِتُنذِرَ أُمَّ ٱلۡقُرَىٰ
وَمَنۡ حَوۡلَهَاۚ وَٱلَّذِينَ يُؤۡمِنُونَ بِٱلۡأٓخِرَةِ
يُؤۡمِنُونَ بِهِۦ وَهُمۡ عَلَىٰ صَلَاتِهِمۡ
يُحَافِظُونَ ٩٢

92. Kanna waa kitaab aan soo dejinay oo barakaysan, oo rumayn wixii ka horreeyey iyo inaad ugu digtid maka iyo dhinacyadeeda, kuwa rumayn aakhiro waxay rumeyn quraanka salaaddana way ilaalin.

Aayaddaan hore wuxuu Alle ku sheegi inayan gaaladu qaddarinin Alle mudnaantiisa, markay dheheen wax kitaab ah Alle kuma soo dejinin cidna, waxaase la waydiiyey yaa soo dejiyey tawreeddii Nabi Muuse, oy yuhuuddu qiraysay oy qaarna muujinayeen qaarna qarinayeen, lana baray waxayna aqoon iyaga iyo aabayaalkood, kuwaas waa in warkooda layska dhaafo ha dabbaasheen xumaane, kitaabka quraanka ahna waa kitaab barakaysan, oo rumayn xaqii ka horreeyey si loogu digo dadka, kuwa rumeeyey aakhirana way rumeeyeen quraankooda, salaaddana way ilaalin.

Nabigana waxaa loo diray dadkoo dhan, quraankuna waa digniinta caalamka oo dhan. Siduu Nabigu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): waxaa la ii soo bixiyey dadka dhammaantiis. Taasina waxay ku waajibin dadkoo dhan inay rumeeyaan oo raacaan kuna dhaqmaan quraanka iyo sunada Nabiga. **[Al-Ancaam: 91-92].**

93. Yaa ka dambi badan cid ku been abuuratay Alle ama yidhi waa lay waxyooday isagoon loo waxyoonin waxba, iyo ciddii dhahda waxaan soo dejin waxa Alle soo dejiyey oo kale, haddaad aragto markay daalimiintu sakaraadka geerida ku sugan yihiin malaa'igtuna ku dhihi iyagoo ku taagi gacmaha: bixiya naftiinna, maanta waxaa laydinku abaal marin cadaab dulli ah, sababtuna waa waxaad ku dhahayseen Alle xaqdarro ood ahaydeen kuwo iska wayneeya aayaadkiisa (waxaad arki lahayd wax wayn).

وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنِ ٱفْتَرَىٰ عَلَى ٱللَّهِ كَذِبًا
أَوْ قَالَ أُوحِيَ إِلَيَّ وَلَمْ يُوحَ إِلَيْهِ شَيْءٌ
وَمَن قَالَ سَأُنزِلُ مِثْلَ مَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ ۗ وَلَوْ
تَرَىٰٓ إِذِ ٱلظَّٰلِمُونَ فِي غَمَرَٰتِ ٱلْمَوْتِ
وَٱلْمَلَٰٓئِكَةُ بَاسِطُوٓا۟ أَيْدِيهِمْ أَخْرِجُوٓا۟
أَنفُسَكُمُ ۖ ٱلْيَوْمَ تُجْزَوْنَ عَذَابَ ٱلْهُونِ
بِمَا كُنتُمْ تَقُولُونَ عَلَى ٱللَّهِ غَيْرَ ٱلْحَقِّ
وَكُنتُمْ عَنْ ءَايَٰتِهِۦ تَسْتَكْبِرُونَ ﴿٩٣﴾

94. Waxaad noo timaaddeen idinkoo suko ah (kaligiin ah) sidaan idiinku abuurray markii hore, waxaadna kaga timaaddeen waxaan idinku nicmaynay gadaashiinna mana ku aragno agtiinna shafeecayaal-kiinnii, aad sheegayseen inay shuruko yihiin, waxaana go'ay xidhiidhkiinnii waxaana idinka dhumay waxaad sheeganeyseen.

وَلَقَدْ جِئْتُمُونَا فُرَٰدَىٰ كَمَا خَلَقْنَٰكُمْ
أَوَّلَ مَرَّةٍ وَتَرَكْتُم مَّا خَوَّلْنَٰكُمْ وَرَآءَ
ظُهُورِكُمْ ۖ وَمَا نَرَىٰ مَعَكُمْ شُفَعَآءَكُمُ
ٱلَّذِينَ زَعَمْتُمْ أَنَّهُمْ فِيكُمْ شُرَكَٰٓؤُا۟ ۚ
لَقَد تَّقَطَّعَ بَيْنَكُمْ وَضَلَّ عَنكُم مَّا
كُنتُمْ تَزْعُمُونَ ﴿٩٤﴾

Cid ka dulmi badan ma jirto ruux ku been abuurtay Alle ama sheegtay in loo waxyooday isagoon waxba loo waxyoonin, ama sheegtay inuu soo dejin waxa Alle soo dejiyey oo kale, waxayse dhabta ogaan marka sakaraadka geeridu u timaaddo, oo malaa'igtu garaacdo iyadoo canaanan, cadaabna ugu bishaarayn xaq darraday ku hadli jireen iyo isla waynidoodii darteed, cid kastoo is qaad qaaddana waxay uun Alle u imaan iyadoo kali ah, sidii markii hore lagu abuuray, wax xoolo ahna ayan wadannin, wax u shafeecana uusan jirin, uuna go'ay xidhiidhkii iyaga iyo waxay caabudi jireen Alle ka sokow. **[Al-Ancaam: 93-94].**

95. Alle ayaa jeexa xabbadda midhaha ah, iyo timirta, wuxuuna ka soo bixiyaa wax nool wax dhimaad ah, kana soo bixiyaa wax dhimaad ah wax nool, kaasi waa Alle ee xaggee laydiinka iili (xaqa).

* إِنَّ ٱللَّهَ فَالِقُ ٱلْحَبِّ وَٱلنَّوَىٰ ۖ يُخْرِجُ ٱلْحَىَّ مِنَ ٱلْمَيِّتِ وَمُخْرِجُ ٱلْمَيِّتِ مِنَ ٱلْحَىِّ ۚ ذَٰلِكُمُ ٱللَّهُ ۖ فَأَنَّىٰ تُؤْفَكُونَ ﴿٩٥﴾

96. Alle waa ka abuuray iftiinka subaxdii, kana yeelay habeenka xasil, qorraxda iyo dayaxana kuwo wax lugu xisaabsado, taasina waa maamulka Alle adkaada ee og.

فَالِقُ ٱلْإِصْبَاحِ وَجَعَلَ ٱلَّيْلَ سَكَنًا وَٱلشَّمْسَ وَٱلْقَمَرَ حُسْبَانًا ۚ ذَٰلِكَ تَقْدِيرُ ٱلْعَزِيزِ ٱلْعَلِيمِ ﴿٩٦﴾

97. Alle waa kan idiin yeelay xiddigo si aad ugu toostaan mugdiga barriga iyo badda, waxaan u caddaynay aayaadka ciddii garan.

وَهُوَ ٱلَّذِى جَعَلَ لَكُمُ ٱلنُّجُومَ لِتَهْتَدُوا۟ بِهَا فِى ظُلُمَٰتِ ٱلْبَرِّ وَٱلْبَحْرِ ۗ قَدْ فَصَّلْنَا ٱلْءَايَٰتِ لِقَوْمٍ يَعْلَمُونَ ﴿٩٧﴾

Alle ayaa wax walba ahaysiiyey, awooddiisaana wax walba ku jiraan, midhaha soo bixintooda, abuuridda waxa nool, iftiinka, waxaasoo dhan waxay ku jiraan awooddiisa. Habeenkana wuxuu Alle ka yeelay xasil, qorraxda iyo dayaxana xisaab. **[Al-Ancaam: 95-97].**

98. Alle waa kan idinka abuuray naf kaliya (Nabi Aadam) idiinna yeelay sugnaansho iyo hoyasho, waan u caddaynay aayaadka ciddii wax kasi.

وَهُوَ ٱلَّذِىٓ أَنشَأَكُم مِّن نَّفْسٍ وَٰحِدَةٍ فَمُسْتَقَرٌّ وَمُسْتَوْدَعٌ ۗ قَدْ فَصَّلْنَا ٱلْءَايَٰتِ لِقَوْمٍ يَفْقَهُونَ ﴿٩٨﴾

99. Alle waa kan ka soo dejiya samada biyo waxaanna ku soo bixinnay (biyihii) wax kastoo dhulka ka soo dhasha, oo aannu ka soo saarnay (xaggiisa) doog cagaaran oon ka soo saarro midho is dul saaran, timirtana

وَهُوَ ٱلَّذِى أَنزَلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَأَخْرَجْنَا بِهِۦ نَبَاتَ كُلِّ شَىْءٍ فَأَخْرَجْنَا مِنْهُ خَضِرًا نُّخْرِجُ مِنْهُ حَبًّا مُّتَرَاكِبًا وَمِنَ ٱلنَّخْلِ مِن طَلْعِهَا قِنْوَانٌ دَانِيَةٌ وَجَنَّٰتٍ مِّنْ أَعْنَابٍ وَٱلزَّيْتُونَ وَٱلرُّمَّانَ

مُشْتَبِهًا وَغَيْرَ مُتَشَٰبِهٍ ۗ ٱنظُرُوٓا۟ إِلَىٰ ثَمَرِهِۦٓ إِذَآ أَثْمَرَ وَيَنْعِهِۦٓ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكُمْ لَـَٔايَٰتٍ لِّقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴿٩٩﴾

fiiddeeda waxaa ah laamo dhow, beerana (waan ku soo bixinnaa) oo ah cinab, zaytuun, rummaan, (qaar) isu eg, iyo qaar aan isu ekayn, daya midhihiisa markuu midho dhalo iyo bisaylkiisa, taasina calaamaa ugu sugan ciddii wax rumayn.

وَجَعَلُوا۟ لِلَّهِ شُرَكَآءَ ٱلْجِنَّ وَخَلَقَهُمْ ۖ وَخَرَقُوا۟ لَهُۥ بَنِينَ وَبَنَٰتٍۢ بِغَيْرِ عِلْمٍ ۚ سُبْحَٰنَهُۥ وَتَعَٰلَىٰ عَمَّا يَصِفُونَ ﴿١٠٠﴾

100. Waxay u yeeleen gaaladu Alle shurako jinni ah isagoo abuuray, waxay ku sheegeen (been) Alle wiilal iyo gabdho iyagoon wax ogayn, waa ka nasahan yahay Alle waana ka sarreeyaa waxay ku sheegi.

Alle waa kan ka abuuray dadka Aadam, kuna sugay uurka hooyo, iyo jidhka ragga, kuna sugay adduunka una celin aakhiro, aayaadkana u caddeeyey ciddii kasi, cirkana roob ka keenay kuna soo bixiya khayraad badan oo lagu nacfiyo, oo ciddii xaqa rumayn ay ku waano qaadato, Allehaas yey gaaladu u yeeleen kuwo la wadaaga cibaadada oo jinni ah, isagoo abuuray, waxayna ku sheegeen carruur iyagoo jaahiliin ka ah, Alle na waa ka dheer yahay waxay ku sheegi, waxaana halkan ka muuqda waynida awoodda Alle, naxariistiisa, caqli xumada gaalada iyo xaq diidnimadooda. **[Al-Ancaam: 98-100].**

بَدِيعُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۖ أَنَّىٰ يَكُونُ لَهُۥ وَلَدٌ وَلَمْ تَكُن لَّهُۥ صَٰحِبَةٌ ۖ وَخَلَقَ كُلَّ شَىْءٍ ۖ وَهُوَ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمٌ ﴿١٠١﴾

101. Alle waa kan abuuray samooyinka iyo dhulka sideese ilmo ugu ahaan isagoon haweenay lahayn, wax walbana abuuray wax kastana og.

ذَٰلِكُمُ ٱللَّهُ رَبُّكُمْ ۖ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ۖ خَٰلِقُ كُلِّ شَىْءٍ فَٱعْبُدُوهُ ۚ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ وَكِيلٌ ﴿١٠٢﴾

102. Kaasi waa Allihiin, isaga mooyee ilaah kale oo xaq lugu caabudo ma jiro, wax kastana isagaa abuuray ee caabuda wax walbana isagaa u wakiil ah (ilaaliya).

لَّا تُدۡرِكُهُ ٱلۡأَبۡصَٰرُ وَهُوَ يُدۡرِكُ ٱلۡأَبۡصَٰرَۖ وَهُوَ ٱللَّطِيفُ ٱلۡخَبِيرُ ﴿١٠٣﴾

103. Aragyaalku Alle ma koobaan, isagaase kooba arag yaalka (wuu arkaa Alle lamase arko adduunka) waana wax oge xeeldheer.

قَدۡ جَآءَكُم بَصَآئِرُ مِن رَّبِّكُمۡۖ فَمَنۡ أَبۡصَرَ فَلِنَفۡسِهِۦۖ وَمَنۡ عَمِيَ فَعَلَيۡهَاۚ وَمَآ أَنَا۠ عَلَيۡكُم بِحَفِيظٖ ﴿١٠٤﴾

104. (Waxaad dhahdaa) waxaa idiin yimid (idin soo gaadhay) xujooyin Allihiin ka yimid, ciddii aragta (ku hanuunta) naftiisa umbuu wax u taray ciddii ka indho beeshana naftiisuu dhibay, anna ma ihi mid idin ilaalin.

وَكَذَٰلِكَ نُصَرِّفُ ٱلۡأٓيَٰتِ وَلِيَقُولُواْ دَرَسۡتَ وَلِنُبَيِّنَهُۥ لِقَوۡمٖ يَعۡلَمُونَ ﴿١٠٥﴾

105. Saasaannu u gagadinnaa (caddaynaa) aayaadka inay dhahaan waad akhrisatay iyo inaan u caddayno ciddii wax garan.

Alle ayaa wax walba ahaysiiyey, cir, dhul iyo wax kastaba, umana baahna carruur iyo haweeney illeen isagaa wax walba abuuraye, wax kastana oge, tilmaantaas waxaa mudan Alle, isaga mooyee ilaah kale oo xaq lugu caabudo ma jiro, ee ha la caabudo, waana ilaaliyaha wax kasta, lamana arko adduunka illeen lama awoodee, isaguse wuu arkaa waana wax walba oge, dadkana waxaa xagga Alle ka soo gaadhay xaq, ciddii ku waano qaadata waa isaga, tii ka indho beeshana waa iyada, Nabiguna ilaaliye uma aha, waana loo caddeeyey xaqa, waxaase jira kuwo ku sheegi Nabiga inuu ka akhristay quraanka meelo kale, waase kuwa aan wax ogayn. **[Al-Ancaam: 101-105].**

ٱتَّبِعۡ مَآ أُوحِيَ إِلَيۡكَ مِن رَّبِّكَۖ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَۖ وَأَعۡرِضۡ عَنِ ٱلۡمُشۡرِكِينَ ﴿١٠٦﴾

106. Raac Nabiyow waxa lagaaga waxyooday xagga Rabbigaa, Allaah mooyee macbuud kale oo xaq lugu caabudo ma jiro, kana jeedso mushrikiinta.

وَلَوۡ شَآءَ ٱللَّهُ مَآ أَشۡرَكُواْۚ وَمَا جَعَلۡنَٰكَ عَلَيۡهِمۡ حَفِيظٗاۖ وَمَآ أَنتَ عَلَيۡهِم بِوَكِيلٖ ﴿١٠٧﴾

107. Hadduu doono Alle mayna la wadaajiyeen, kaagamana aannaan yeelin ilaaliye, wakiilna kama tihid.

وَلَا تَسُبُّواْ ٱلَّذِينَ يَدۡعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ فَيَسُبُّواْ ٱللَّهَ عَدۡوَۢا بِغَيۡرِ عِلۡمٖۗ كَذَٰلِكَ زَيَّنَّا لِكُلِّ أُمَّةٍ عَمَلَهُمۡ ثُمَّ إِلَىٰ رَبِّهِم مَّرۡجِعُهُمۡ فَيُنَبِّئُهُم بِمَا كَانُواْ يَعۡمَلُونَ ١٠٨

108. Ha caayina waxay caabudi oo Alle ka soo hadhay oo markaas iyana caayaan Alle colnimo iyo cilmi la'aan, saasaan ugu qurxinnay ummad kasta camalkeeda, xagga Alle umbayna noqoshadoodu tahay wuxuuna uga warrami waxay fali jireen.

Alle wuxuu u dardaarmay Rasuulkiisa inuu raaco waxa Alle u waxyooday, illeen Allaah mooyee ilaah kale oo xaq lugu caabudo ma jiree, iyo inuu isaga jeedsado gaalada, wax walbana awoodda Alle unbuu ku jiraa, Nabiguna ilaaliyaha dadka ma aha.

Tan kale waa inaan la caayin waxay caabudi oo markaas iyana Alle u caayin colnimo iyo jaahilnimo, illeen ummad kastaa waxaa loo qurxiyey camalkoodee waxaana loo celin xagga Rabbigood wuxuuuna uga warrami waxay camal falayeen, waxaa jirtay gaaladii Qureesh in ay Abiidaalib u tageen oo ku dhaheen ha naloo daayo ilaahyadanada, anaguna aan u daynno ilaahiisa, haddii kale waxaan caayaynaa Ilaahay, markaasay soo degtay aayaddu, taasina waxay ku tusin in si miyir iyo cay la'aan Alle loogu yeedho dadka, ee canaan, cay iyo hadal adag ayna wax tarayn. **[Al-Ancaam: 106-108].**

وَأَقۡسَمُواْ بِٱللَّهِ جَهۡدَ أَيۡمَٰنِهِمۡ لَئِن جَآءَتۡهُمۡ ءَايَةٞ لَّيُؤۡمِنُنَّ بِهَاۚ قُلۡ إِنَّمَا ٱلۡأٓيَٰتُ عِندَ ٱللَّهِۖ وَمَا يُشۡعِرُكُمۡ أَنَّهَآ إِذَا جَآءَتۡ لَا يُؤۡمِنُونَ ١٠٩

109. Waxay ku dhaarteen Alle gaaladii dhaar adag, hadday soo gaadho aayadi inay rumaynayaan, waxaad dhahdaa aayaadku waxay jiraan Alle agtiisa, maxaase idin ogeysiiyay hadday aayaddu soo gaadho inayna rumaynayn.

وَنُقَلِّبُ أَفۡـِٔدَتَهُمۡ وَأَبۡصَٰرَهُمۡ كَمَا لَمۡ يُؤۡمِنُواْ بِهِۦٓ أَوَّلَ مَرَّةٖ وَنَذَرُهُمۡ فِي طُغۡيَٰنِهِمۡ يَعۡمَهُونَ ١١٠

110. Waxaannu gaddin quluubtooda iyo araggooda (oo ma rumaynayaan) sidayna u rumayn markii horaba, waxaana ku daynaynaa iyagoo ku wareersan xadgudubkooda.

* وَلَوۡ أَنَّنَا نَزَّلۡنَآ إِلَيۡهِمُ ٱلۡمَلَٰٓئِكَةَ وَكَلَّمَهُمُ ٱلۡمَوۡتَىٰ وَحَشَرۡنَا عَلَيۡهِمۡ

111. Haddaan ku soo dejinno malaa'ig oo dadkii dhintay la hadlo oon wax kasta

hortooda ku soo kulminno, mayna rumeeyeen in Alle doono mooyee, hase yeeshee badankood waa jaahiliin.

كُلَّ شَيْءٍ قُبُلًا مَّا كَانُوا۟ لِيُؤْمِنُوٓا۟ إِلَّآ أَن يَشَآءَ ٱللَّهُ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ يَجْهَلُونَ ﴿١١١﴾

Gaaladu wanaagga kuma toosaan, waxayna ku deg degaan dhaarta Alle, waxaana jirtay in gaaladii Makaad ku dhaaran jireen in haddii Alle mucjisad soo dejiyo ay rumayn, Alle ayaase awooddaas leh, hadday soo gaadhana ma rumaynayaan, markay xaqa diideen ayuuna Alle sii iilay qalbigooda iyo araggooda, si ay xumaanta ugu dhexwareeraan xataa haddii malaa'ig lagu soo dejiyo, dadkii dhintayna la hadlo, wax walbana la horkeeno ma rumaynayaan xaqa in Alle doono mooyee, badankooduna waa jaahiliin.

Taasina waxay ku tusin xaqiiqada gaalada iyo siday uga soo hor jeedaan wanaagga.

Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: markay gaaladu diideen waxa Alle soo dejiyay qalbigoodu kuma sugnaanin waxba, wax walbana way diideen. **[Al-Ancaam: 109-111].**

112. Saasaan ugu yeellay Nabi kasta col shaydaan insi iyo jinniba leh, oo qaarkood qaarka kale u waxyoon (sheegi) hadal la dhoobdhoobay, dhumin darteed, hadduu Alle doonana mayna faleen ee iskaga tag iyaga iyo waxay been-abuuran.

وَكَذَٰلِكَ جَعَلْنَا لِكُلِّ نَبِىٍّ عَدُوًّا شَيَٰطِينَ ٱلْإِنسِ وَٱلْجِنِّ يُوحِى بَعْضُهُمْ إِلَىٰ بَعْضٍ زُخْرُفَ ٱلْقَوْلِ غُرُورًا ۚ وَلَوْ شَآءَ رَبُّكَ مَا فَعَلُوهُ ۖ فَذَرْهُمْ وَمَا يَفْتَرُونَ ﴿١١٢﴾

113. Iyo in ay u iilato quluubta kuwaan rumayn aakhiro, iyo inay ka raalli noqdaan, iyo inay kasbadaan waxay guranayeen.

وَلِتَصْغَىٰٓ إِلَيْهِ أَفْـِٔدَةُ ٱلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِٱلْـَٔاخِرَةِ وَلِيَرْضَوْهُ وَلِيَقْتَرِفُوا۟ مَا هُم مُّقْتَرِفُونَ ﴿١١٣﴾

114. (Waxaad ku tiraahdaa) Ma Alle waxaan ahayn yaan u dooni xaakim (na kala xukuma) isagoo idiin soo dejiyey kitaabka oo la caddeeyey, kuwaan siinnay kitaabka waxay og yihiin in quraanka laga soo dejiyey xagga Allehaa ee ha noqonnin kuwa shakiya.

أَفَغَيْرَ ٱللَّهِ أَبْتَغِى حَكَمًا وَهُوَ ٱلَّذِىٓ أَنزَلَ إِلَيْكُمُ ٱلْكِتَٰبَ مُفَصَّلًا ۚ وَٱلَّذِينَ ءَاتَيْنَٰهُمُ ٱلْكِتَٰبَ يَعْلَمُونَ أَنَّهُۥ مُنَزَّلٌ مِّن رَّبِّكَ بِٱلْحَقِّ ۖ فَلَا تَكُونَنَّ مِنَ ٱلْمُمْتَرِينَ ﴿١١٤﴾

وَتَمَّتْ كَلِمَتُ رَبِّكَ صِدْقًا وَعَدْلًا ۚ لَّا مُبَدِّلَ لِكَلِمَٰتِهِۦ ۚ وَهُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْعَلِيمُ ﴿١١٥﴾

115. Waxay ku taam noqotay kalimadda Allehaa run iyo caddaalad, wax badali kalimooyinka Alle na ma jiro, Alle na waa maqle og.

Nabi kasta wuxuu lahaa col insi iyo jinniba leh, oo wax isu sheega, wuxuuna Alle faray Nabiga inuu warka gaalada iskaga fogaado, illeen waxay maqashaa quluubta kuwaan rumayn xaqa waxa xune, Alle waxaan ahayn ma mudna in xaakin laga yeesho, illeen isagaa soo dejiyey kitaabka quraanka ah oo cad, yuhuud iyo nasaarana waa og yihiin in xagga Allehaa looga soo dejiyey si xaqa, in la shakiyana ma habboona, sharciga Alle na waa dhan yahay isagoo run iyo caddaalad ah, wax badali karana ma jiro, Alle na waa maqle og.

Saas darteed waa in xaqa lagu toosnaado shaydaanna laga digtoonaado insi iyo jinba. Waxaa sugnaaday in Abuudar warsaday Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) in dadku shaydaanno leeyahay oo uu ku yidhi: haa, iyagaaba ka daran kuwa jinniga. **[Al-Ancaam: 112-115].**

وَإِن تُطِعْ أَكْثَرَ مَن فِى ٱلْأَرْضِ يُضِلُّوكَ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ ۚ إِن يَتَّبِعُونَ إِلَّا ٱلظَّنَّ وَإِنْ هُمْ إِلَّا يَخْرُصُونَ ﴿١١٦﴾

116. Haddaad maqashid waxa dhulka ku sugan badankooda waxay kaa dhumin jidka Alle, mana raacayaan waxaan malo ahayn waana beenaalayaal.

إِنَّ رَبَّكَ هُوَ أَعْلَمُ مَن يَضِلُّ عَن سَبِيلِهِۦ ۖ وَهُوَ أَعْلَمُ بِٱلْمُهْتَدِينَ ﴿١١٧﴾

117. Allehaa yaa og cidda ka dhumi jidkiisa, isagaana og cidda hanuunsan.

فَكُلُوا۟ مِمَّا ذُكِرَ ٱسْمُ ٱللَّهِ عَلَيْهِ إِن كُنتُم بِـَٔايَٰتِهِۦ مُؤْمِنِينَ ﴿١١٨﴾

118. Ee cuna waxa magaca Alle lagu xusay haddaad aayaadkiisa rumaynaysaan.

وَمَا لَكُمْ أَلَّا تَأْكُلُوا۟ مِمَّا ذُكِرَ ٱسْمُ ٱللَّهِ عَلَيْهِ وَقَدْ فَصَّلَ لَكُم مَّا حَرَّمَ عَلَيْكُمْ إِلَّا مَا ٱضْطُرِرْتُمْ إِلَيْهِ ۗ وَإِنَّ كَثِيرًا لَّيُضِلُّونَ بِأَهْوَآئِهِم بِغَيْرِ عِلْمٍ ۗ إِنَّ رَبَّكَ هُوَ أَعْلَمُ بِٱلْمُعْتَدِينَ ﴿١١٩﴾

119. Maxaad la cuni waydeen waxa magaca Alle lagu xusi, isagoo laydiin caddeeyey waxa laydinka reebay inaad dhibban tihiin mooyee, wax badan waxay ku dhumin (dadka) hawadooda cilmi darro, Rabbigaana waa og yahay kuwa xad-gudba.

Dadka badankiisu waxay dhumiyaan dadka, waxaan malo iyo been ahayna ma raacaan, Alle na waa og yahay cidda dhuntay iyo tan hanuunsan. Tan kale wuxuu Alle u banneeyey dadka rumeeyey inay cunaan waxa magaca Alle lagu xusay, illeen Alle ayaa caddeeyey waxa la reebay haddaan dhibaato jirin, dadka badankiisuna waxbay dhumiyaan cilmi darro, Alle na isagaa og cidda hanuunsan. Aayaduhuna waxay muujin in laga digtoonaado xumaan farayaasha, xalaashana la cuno, xaaraantana laga dheeraado. **[Al-Ancaam: 116-119].**

وَذَرُوا۟ ظَٰهِرَ ٱلْإِثْمِ وَبَاطِنَهُۥٓ ۚ إِنَّ ٱلَّذِينَ يَكْسِبُونَ ٱلْإِثْمَ سَيُجْزَوْنَ بِمَا كَانُوا۟ يَقْتَرِفُونَ ﴿١٢٠﴾

120. Ka taga dambiga muuqda iyo kan qarsoonba, kuwa kasbada dambigana waxaa laga abaal marin waxay kasbanayeen.

وَلَا تَأْكُلُوا۟ مِمَّا لَمْ يُذْكَرِ ٱسْمُ ٱللَّهِ عَلَيْهِ وَإِنَّهُۥ لَفِسْقٌ ۗ وَإِنَّ ٱلشَّيَٰطِينَ لَيُوحُونَ إِلَىٰٓ أَوْلِيَآئِهِمْ لِيُجَٰدِلُوكُمْ ۖ وَإِنْ أَطَعْتُمُوهُمْ إِنَّكُمْ لَمُشْرِكُونَ ﴿١٢١﴾

121. Ha cunina waxaan lagu xusin magaca Alle, illeen waa xumaane, shaydaammaduna waxbay u sheegaan saaxiibbadooda si ay idinla murmaan, haddaad maqashaanna waxaad noqonaysaan gaalo.

أَوَمَن كَانَ مَيْتًا فَأَحْيَيْنَٰهُ وَجَعَلْنَا لَهُۥ نُورًا يَمْشِى بِهِۦ فِى ٱلنَّاسِ كَمَن مَّثَلُهُۥ فِى ٱلظُّلُمَٰتِ لَيْسَ بِخَارِجٍ مِّنْهَا ۚ كَذَٰلِكَ زُيِّنَ لِلْكَٰفِرِينَ مَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿١٢٢﴾

122. Cid mayd ahayd oon noolaynay oon u yeellay nuur uu ku dhex socdo dadka ma la mid baa mid mugdi ku sugan oon ka baxayn, saasaana loogu qurxiyey gaalada waxay falayeen.

Aayadda hore wuxuu Alle ku faray in dambiga dhammaantiis laga tago, mid muuqda iyo mid qarsoonba, ciddii dambi kasbatana waa laga abaal marin wuxuu kasbaday, dambina waa waxa laabtaada kiciya ood neceb tahay in dadku kugu arko, siduu Nabigu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee).

Aayadda kalana waxay reebi in la cuno waxaan magaca Alle lagu xusin marka la gawrici, uuna yahay jidka fiican oo laga baxo, illeen shaydaanka yaa wax u sheega saaxiibbadiis si ay ugula murmaan muslimiinta, ciddii warkaas maqashana oo raacda waa mid gaalowday.

Gaaladi ayaa Nabiga ku yidhi:-ma waxaan cunaynaa waxaan dillay oo aynaan cunayn waxa Alle dilay, markaasay soo degtay aayaddu.

Tan kale waa tusaale Alle u yeelay cidda hanuunsan iyo cidda dhunsan oo shabaha mayd iyo noole, illeen midina nuur buu ku socdaa midina mugdi buu ku sugan yahay uusan ka baxayn, gaalana waxaa loo qurxiyey waxa xun oy falayaan, aayaduhuna waxay muujin in xumaanta laga tago, xalaashana la cuno, shaydaankana laga digtoonaado, jidka fiicanna la qaado. **[Al-Ancaam: 120-122].**

وَكَذَٰلِكَ جَعَلْنَا فِي كُلِّ قَرْيَةٍ أَكَٰبِرَ مُجْرِمِيهَا لِيَمْكُرُوا۟ فِيهَا ۖ وَمَا يَمْكُرُونَ إِلَّا بِأَنفُسِهِمْ وَمَا يَشْعُرُونَ ﴿١٢٣﴾

123. Saasaan ugu yeellay magaalo kasto dambiilayaal waawayn, inay wax ku dhagraan dhexdeeda, waxaan naftooda ahayna ma dhagrayaan mase oga.

وَإِذَا جَآءَتْهُمْ ءَايَةٌ قَالُوا۟ لَن نُّؤْمِنَ حَتَّىٰ نُؤْتَىٰ مِثْلَ مَآ أُوتِىَ رُسُلُ ٱللَّهِ ۘ ٱللَّهُ أَعْلَمُ حَيْثُ يَجْعَلُ رِسَالَتَهُۥ ۗ سَيُصِيبُ ٱلَّذِينَ أَجْرَمُوا۟ صَغَارٌ عِندَ ٱللَّهِ وَعَذَابٌ شَدِيدٌۢ بِمَا كَانُوا۟ يَمْكُرُونَ ﴿١٢٤﴾

124. Markay soo gaadho aayad waxay dhahaan rumayn maynno inta nalooga keeno wixii la siiyey rasuulladii Alle, Ilaahay baana og meeshuu yeeli rasuulnimada, waxaana ku dhici kuwii dambaabay dulli Alle agtiisa ah iyo cadaab daran waxay dhagrayeen darteed.

فَمَن يُرِدِ ٱللَّهُ أَن يَهْدِيَهُۥ يَشْرَحْ صَدْرَهُۥ لِلْإِسْلَٰمِ ۖ وَمَن يُرِدْ أَن يُضِلَّهُۥ يَجْعَلْ صَدْرَهُۥ ضَيِّقًا حَرَجًا كَأَنَّمَا يَصَّعَّدُ فِى ٱلسَّمَآءِ ۚ كَذَٰلِكَ يَجْعَلُ ٱللَّهُ ٱلرِّجْسَ عَلَى ٱلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿١٢٥﴾

125. Cidduu Alle hanuuniyo wuxuu u waasiciyaa laabtiisa islaamka, cidduu doono inuu dhumiyana wuxuu ka yeelaa laabtiisa cidhiidhi «dhib» ah sidii isagoo kori samada, saasuuna u yeelay Alle xumaanta korka kuwaan rumaynin xaqa.

Meel kasta waxaa jooga dad xun oo fasaad ka shaqeeya, dhagarna maleega, xaqana beeniya iyagoo codsan in la tusiyo mucjisooyin la mida kuwii hore, awoodda iyo tasarrufkase Alle ayaa iska leh, waxaana ku dhici dambiilayaasha dulli iyo cadaab daran dhagartooda darteed, Alle na isagaa og cidduu dooran iyo cidduu u waxyoon. Cidduu Alle hanuun la doono laabtiisuu u waasiciyaa xaqa, ciddii kalana laabteeduu cidhiidhi ka yeelaa sidii ruux samada u koraya, xumaanna waxay ku dhan tahay kuwaan rumaynin xaqa.

Nabigana (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) waxaa la warsaday

laabta la waasiciyey, wuxuuna yidhi: waa nuur Alle ku tuuro qalbiga ruuxa, markaasay dheheen maxaa lagu garan? Markaasuu yidhi: aakhiro oo loo diyaargaroobo, adduunyadoon lagu khaldamin, iyo diyaargarow geeri ka hor. **[Al-Ancaam: 123-125].**

وَهَٰذَا صِرَٰطُ رَبِّكَ مُسْتَقِيمًا ۗ قَدْ فَصَّلْنَا ٱلْءَايَٰتِ لِقَوْمٍ يَذَّكَّرُونَ ﴿١٢٦﴾

126. Wakaas jidkii Allehaa oo toosan aayaadkana waxaan u caddaynay ciddii wax xusuusan.

* لَهُمْ دَارُ ٱلسَّلَٰمِ عِندَ رَبِّهِمْ ۖ وَهُوَ وَلِيُّهُم بِمَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿١٢٧﴾

127. Waxayna mudan yihiin guri nabadgalyo oo Rabbigood agtiisa ah, isagaana gargaarahooda ah waxay camal falayeen dartiis.

وَيَوْمَ يَحْشُرُهُمْ جَمِيعًا يَٰمَعْشَرَ ٱلْجِنِّ قَدِ ٱسْتَكْثَرْتُم مِّنَ ٱلْإِنسِ ۖ وَقَالَ أَوْلِيَآؤُهُم مِّنَ ٱلْإِنسِ رَبَّنَا ٱسْتَمْتَعَ بَعْضُنَا بِبَعْضٍ وَبَلَغْنَآ أَجَلَنَا ٱلَّذِىٓ أَجَّلْتَ لَنَا ۚ قَالَ ٱلنَّارُ مَثْوَىٰكُمْ خَٰلِدِينَ فِيهَآ إِلَّا مَا شَآءَ ٱللَّهُ ۗ إِنَّ رَبَّكَ حَكِيمٌ عَلِيمٌ ﴿١٢٨﴾

128. Xusuuso maalintuu Alle kulmin dhammaantood (kuna dhihi) kulanka jinniyow waad badsateen (baadiyeynta) insiga waxayna dhehaan saaxiibadood oo insiga ah Rabbigeenow qaarkanno qaarbuu ku shaqaystay waxaana gaadhnay ajashaad (muddadaad) noo samaysay, wuxuuna ku yidhi: naar baa hoyaadkiinna ah, idinkoo ku waari dhexdeeda wuxuu Alle doono mooyee, Rabbigaana waa falsame oge ah.

وَكَذَٰلِكَ نُوَلِّى بَعْضَ ٱلظَّٰلِمِينَ بَعْضًۢا بِمَا كَانُوا۟ يَكْسِبُونَ ﴿١٢٩﴾

129. Saasaana ugu dirraa daalimiinta qaarkood qaarka kale waxay kasbanayeen darteed.

Markuu Alle sheegay jidka kuwa dhumay yuu raaciyey jidka toosan ee xaqa ah, waana u cad yahay ciddii waantoobi, waxaana kuwaas u sugnaaday guri nabadgalyo oo jannada ah, illeen xumaan iyo balaayoo dhan yey ka nabadgashaye, Alle ayaana gargaare u ah camalkooda dartiis.

Markaasuu Alle sheegay soo kulmin insi iyo jinniba oy markaas sheegi in midkood kan kale ku intifaacay intay ka gaadhaan muddaduu Alle u qabtay, taasoo ah in insigu magan gali jiray jinniga, wuxuuse Alle ku xukumay naaray ku waari, wuxuu Alle doono mooyee, waxaana caadi ah in daalimiinta

qaarkood qaar lagu diro oo taladiisa uu gacanta ku dhigo, taasina waxay ku tusin in gaaladu sokeeye isu yihiin, siduu yidhi Qataade: mu'minku waa sokeeyaha mu'minka meel kastooy joogaan, gaaladuna waa sokeeyaha gaalka meel kastooy joogaan. **[Al-Ancaam: 126-129].**

يَٰمَعۡشَرَ ٱلۡجِنِّ وَٱلۡإِنسِ أَلَمۡ يَأۡتِكُمۡ رُسُلٞ مِّنكُمۡ يَقُصُّونَ عَلَيۡكُمۡ ءَايَٰتِي وَيُنذِرُونَكُمۡ لِقَآءَ يَوۡمِكُمۡ هَٰذَاۚ قَالُواْ شَهِدۡنَا عَلَىٰٓ أَنفُسِنَاۖ وَغَرَّتۡهُمُ ٱلۡحَيَوٰةُ ٱلدُّنۡيَا وَشَهِدُواْ عَلَىٰٓ أَنفُسِهِمۡ أَنَّهُمۡ كَانُواْ كَٰفِرِينَ ١٣٠

130. Jinni iyo insiyow miyuuna idiin imaanin rasuullo idinka mid ah oo idiinka warrama aayaadkayga idiinkana diga la kulanka maalintan, waxayna dheheen waan ku marag furray naftannada, waxaana dhagartay nolosha dhaw, waxayna ku marag fureen naftooda inay gaalo ahaayeen.

ذَٰلِكَ أَن لَّمۡ يَكُن رَّبُّكَ مُهۡلِكَ ٱلۡقُرَىٰ بِظُلۡمٖ وَأَهۡلُهَا غَٰفِلُونَ ١٣١

131. Arrintaasna waa inaan Allehaa halaagin magaalo dulmi dartiis iyadoo dadkeedu halmaansan yihiin (aan loo digin).

وَلِكُلّٖ دَرَجَٰتٞ مِّمَّا عَمِلُواْۚ وَمَا رَبُّكَ بِغَٰفِلٍ عَمَّا يَعۡمَلُونَ ١٣٢

132. Cid kasta darajooyin yey leedahay oo waxay camal fashay ah, Rabbigaana ma ahan mid halmaansan waxay camal faleen.

وَرَبُّكَ ٱلۡغَنِيُّ ذُو ٱلرَّحۡمَةِۚ إِن يَشَأۡ يُذۡهِبۡكُمۡ وَيَسۡتَخۡلِفۡ مِنۢ بَعۡدِكُم مَّا يَشَآءُ كَمَآ أَنشَأَكُم مِّن ذُرِّيَّةِ قَوۡمٍ ءَاخَرِينَ ١٣٣

133. Rabbigaana waa hodan naxriis badan, hadduu doono wuu idin baabi'in idinkuna bedali gadaashiin cidduu doono, siduu idiinka abuuray faracii qoom kale.

إِنَّ مَا تُوعَدُونَ لَأٓتٖۖ وَمَآ أَنتُم بِمُعۡجِزِينَ ١٣٤

134. Waxa laydiin yaboohi wuu imaan, Alle na ma daalisaan.

قُلۡ يَٰقَوۡمِ ٱعۡمَلُواْ عَلَىٰ مَكَانَتِكُمۡ إِنِّي عَامِلٞۖ فَسَوۡفَ تَعۡلَمُونَ مَن تَكُونُ لَهُۥ

135. Waxaad dhahdaa qoomkayow ku camal fala sidiinnaas, anna waan camal faliye, waxaadna

ogaan doontaan cidday cidhib dambe u ahaatee, mana liibaano daalime.

عَقِبَةُ ٱلدَّارِۚ إِنَّهُۥ لَا يُفۡلِحُ ٱلظَّٰلِمُونَ ﴿١٣٥﴾

Aayadahanna wuxuu Alle ku sheegey in qiyaamada la warsan gaalada insi iyo jinniba inuu u yimid rasuul u diga iyo in kale, waxay isku marag fureen inay u timid, waxaase khayaantay adduunyadii, waxayna isku marag fureen inay gaalo ahaayeen, Alle na ma halaago dad uusan u soo dirin hanuuniye, cid walbana waxay mudan darajo waxay kasbatay, Alle na ma halmaamo waxay fali dadku.

Alle na waa hodan naxariista, cidduu doonana wuu halaagi oo mid kale ku badali, wax Alle daalinna ma jiro, cid walbana ha fasho waxay rabto, daalimna ma liibaano. **[Al-Ancaam: 130-135].**

136. Waxay uga yeeleen Alle wuxuu abuuray oo beero iyo xoola ah qayb, waxayna dheheen kan Alle ayaa iska leh, sheegashadooda, kanna waxaa iska leh shurukadannada (sanamyada), waxa sanamyadu ma gaadho Alle, waxa Alle na wuxuuu gaadhaa sanamyadooda, waxaa xun waxay xukumeen.

وَجَعَلُواْ لِلَّهِ مِمَّا ذَرَأَ مِنَ ٱلۡحَرۡثِ وَٱلۡأَنۡعَٰمِ نَصِيبٗا فَقَالُواْ هَٰذَا لِلَّهِ بِزَعۡمِهِمۡ وَهَٰذَا لِشُرَكَآئِنَاۖ فَمَا كَانَ لِشُرَكَآئِهِمۡ فَلَا يَصِلُ إِلَى ٱللَّهِۖ وَمَا كَانَ لِلَّهِ فَهُوَ يَصِلُ إِلَىٰ شُرَكَآئِهِمۡۗ سَآءَ مَا يَحۡكُمُونَ ﴿١٣٦﴾

137. Saasayna ugu qurxiyeen in badan oo gaalada ah dilidda caruurtooda shurukadoodu (shayaadiintu), si ay u halaagaan kana khaldaan diintooda, hadduu Alle doonana mayna faleen ee isaga tag iyaga iyo waxay been abuuran.

وَكَذَٰلِكَ زَيَّنَ لِكَثِيرٖ مِّنَ ٱلۡمُشۡرِكِينَ قَتۡلَ أَوۡلَٰدِهِمۡ شُرَكَآؤُهُمۡ لِيُرۡدُوهُمۡ وَلِيَلۡبِسُواْ عَلَيۡهِمۡ دِينَهُمۡۖ وَلَوۡ شَآءَ ٱللَّهُ مَا فَعَلُوهُۖ فَذَرۡهُمۡ وَمَا يَفۡتَرُونَ ﴿١٣٧﴾

138. Waxay dheheen tan waa nicmooleey iyo beer reeban oosan ka quudanayn ciddaan doonno mooyee, sheegashadooda, iyo nicmoolay

وَقَالُواْ هَٰذِهِۦٓ أَنۡعَٰمٞ وَحَرۡثٌ حِجۡرٞ لَّا يَطۡعَمُهَآ إِلَّا مَن نَّشَآءُ بِزَعۡمِهِمۡ وَأَنۡعَٰمٌ حُرِّمَتۡ ظُهُورُهَا وَأَنۡعَٰمٞ

la xarrimay dhabarkeeda (in la rarto) iyo nicmoolay aan magaca Alle lagu xusayn, ku been abuurasho darteed, wuxuu ka abaal marin Alle waxay been abuuranayeen.

لَّا يَذْكُرُونَ ٱسْمَ ٱللَّهِ عَلَيْهَا ٱفْتِرَآءً عَلَيْهِۚ سَيَجْزِيهِم بِمَا كَانُواْ يَفْتَرُونَ ﴿١٣٨﴾

Aayadahanna waa canaan iyo guulid gaaladii qaybisay xoolaha iyo beeraha oo qaarna Alle ku sheegay qaarna sanamyada, hadduu waxa sanamku ku darmado kan kalana ay soo celinayaan, hadduu kay Alle ku sheegeen ku darmadana daayaan, waana xaal guud ahaan u xun, waxaa kalooy sanamyadu u qurxiyeen gaalada dilidda caruurtooda, iyagoo xoolana qaar ka reebay inuusan hilibkooda cunayn ciddayna doonin, qaarna ay sii daayeen, qaarna aan lagu gowracayn magaca Alle, waxaasuna waa wax Alle ka abaal marin oo beena, ku tusinna caqli xumada gaalada iyo garasha darridooda. **[Al-Ancaam: 136-138].**

139. Waxay dheheen gaaladii waxa ku jira uurka nicmoolaydan waxay gaar u tahay raggannaga waxayna ka reebban tahay haweenkannaga, hadday bakhti tahayna way wadaagi, wuxuu ka abaal marin Alle tilmaantooda, illeen waa falsame oge.

وَقَالُواْ مَا فِي بُطُونِ هَٰذِهِ ٱلْأَنْعَٰمِ خَالِصَةٌ لِّذُكُورِنَا وَمُحَرَّمٌ عَلَىٰٓ أَزْوَٰجِنَاۖ وَإِن يَكُن مَّيْتَةً فَهُمْ فِيهِ شُرَكَآءُۚ سَيَجْزِيهِمْ وَصْفَهُمْۚ إِنَّهُۥ حَكِيمٌ عَلِيمٌ ﴿١٣٩﴾

140. Waxaa dhab u khasaaray kuwa dilay caruurtooda caqli xumo darteed iyo cilmi la'aan oo reebay wixii Alle ku arzuqay been abuurasho Alle darteed, way dhumeen mana hanuunsana.

قَدْ خَسِرَ ٱلَّذِينَ قَتَلُوٓاْ أَوْلَٰدَهُمْ سَفَهًۢا بِغَيْرِ عِلْمٍ وَحَرَّمُواْ مَا رَزَقَهُمُ ٱللَّهُ ٱفْتِرَآءً عَلَى ٱللَّهِۚ قَدْ ضَلُّواْ وَمَا كَانُواْ مُهْتَدِينَ ﴿١٤٠﴾

141. Alle waa kan soo bixiyey beero la dhisay iyo kuwaan dhisnayn, iyo timir, iyo tallaal uu kala duwan yahay waxa laga cunayo (mirihiisu), iyo saytuun, iyo rummaan isu eg iyo qaar aan

* وَهُوَ ٱلَّذِيٓ أَنشَأَ جَنَّٰتٍ مَّعْرُوشَٰتٍ وَغَيْرَ مَعْرُوشَٰتٍ وَٱلنَّخْلَ وَٱلزَّرْعَ مُخْتَلِفًا أُكُلُهُۥ وَٱلزَّيْتُونَ وَٱلرُّمَّانَ مُتَشَٰبِهًا وَغَيْرَ مُتَشَٰبِهٍۚ كُلُواْ مِن ثَمَرِهِۦٓ

إِذَآ أَثۡمَرَ وَءَاتُواْ حَقَّهُۥ يَوۡمَ حَصَادِهِۦۖ وَلَا تُسۡرِفُوٓاْۚ إِنَّهُۥ لَا يُحِبُّ ٱلۡمُسۡرِفِينَ ١٤١

isu ekeyn, ka cuna midhihiisa markuu miro bixiyo. Bixiyana xaqiisa (sakada) maalinta la goyn, hana xad gudbina Alle ma jecla kuwa xadgudbee.

وَمِنَ ٱلۡأَنۡعَٰمِ حَمُولَةٗ وَفَرۡشٗاۚ كُلُواْ مِمَّا رَزَقَكُمُ ٱللَّهُ وَلَا تَتَّبِعُواْ خُطُوَٰتِ ٱلشَّيۡطَٰنِۚ إِنَّهُۥ لَكُمۡ عَدُوّٞ مُّبِينٞ ١٤٢

142. Nicmoolayda xaggeeda wuxuu ka abuuray mid la rarto, iyo mid kuwa yar yara, ka cuna waxa Alle idinku arzaaqay hana raacina tallaabooyinka shaydaanka illeen waa colkiinna oo cade.

Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: caanaha waxay u diidi jireen gabdhaha waxayna siin jireen wiilasha, hadduu neefka dhaddiga ah lab dhalo way gawrici jireen, waxayna siin jireen ragga, hadduu dhadig yahayna way dayn jireen, hadduu bakhti yahayna way wadaagi jireen, markaasuu Alle ka reebay arrintaas, waxaa kale oo uu yidhi: haddaad dooni inaad ogaato jaahilnimadii carab akhri waxa ka sarreeya boqol iyo soddan suuradda ancaam.

Aayadaha kalana wuxuu Alle ku sheegay nicmooyinka iyo khayraadka dhulka ka soo baxa, wuxuuna faray in laga bixiyo xaqiisa, oon laguna xad gudbin, xoolahana waxaa ka mid ah kuwo la rarto iyo kuwo yar yar, waana in nicmada Alle si fiican loo cunaa oon lana raacin waddooyinka shaydaanka illeen waa colka dadkee, mana habboona in nicmada Alle lagu kibro ama lagu xadugudbo. **[Al-Ancaam: 139-142].**

ثَمَٰنِيَةَ أَزۡوَٰجٖۖ مِّنَ ٱلضَّأۡنِ ٱثۡنَيۡنِ وَمِنَ ٱلۡمَعۡزِ ٱثۡنَيۡنِۗ قُلۡ ءَآلذَّكَرَيۡنِ حَرَّمَ أَمِ ٱلۡأُنثَيَيۡنِ أَمَّا ٱشۡتَمَلَتۡ عَلَيۡهِ أَرۡحَامُ ٱلۡأُنثَيَيۡنِۖ نَبِّـُٔونِي بِعِلۡمٍ إِن كُنتُمۡ صَٰدِقِينَ ١٤٣

143. Waa siddeed nooc labo ido ah iyo labo riyo ah (lab iyo dhidig). Ma labada lab yuu reebay Alle mise labada dhadig mise waxa uurka kuwa dhadig ku jira, noo warrama cilmi haddaad run sheegaysaan.

وَمِنَ ٱلۡإِبِلِ ٱثۡنَيۡنِ وَمِنَ ٱلۡبَقَرِ ٱثۡنَيۡنِۗ قُلۡ ءَآلذَّكَرَيۡنِ حَرَّمَ أَمِ ٱلۡأُنثَيَيۡنِ أَمَّا ٱشۡتَمَلَتۡ عَلَيۡهِ أَرۡحَامُ ٱلۡأُنثَيَيۡنِۖ

144. Geelana labo ka mida, lo'dana labo, dheh ma labada lab yuu Alle reebay mise kuwa dhadig mise waxa uurka kuwa dhadig ku jira, mise marag

أَمْ كُنتُمْ شُهَدَآءَ إِذْ وَصَّىٰكُمُ ٱللَّهُ بِهَٰذَا ۚ فَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنِ ٱفْتَرَىٰ عَلَى ٱللَّهِ كَذِبًا لِّيُضِلَّ ٱلنَّاسَ بِغَيْرِ عِلْمٍ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿١٤٤﴾

baad ka ahaydeen markuu idin faray Alle sidaas, yaase ka dulmi badan cid ku been abuurtay Alle, si uu u dhumiyo dadka cilmi darro, Allana ma hanuuniyo qoom daalimiina.

قُل لَّآ أَجِدُ فِى مَآ أُوحِىَ إِلَىَّ مُحَرَّمًا عَلَىٰ طَاعِمٍ يَطْعَمُهُۥٓ إِلَّآ أَن يَكُونَ مَيْتَةً أَوْ دَمًا مَّسْفُوحًا أَوْ لَحْمَ خِنزِيرٍ فَإِنَّهُۥ رِجْسٌ أَوْ فِسْقًا أُهِلَّ لِغَيْرِ ٱللَّهِ بِهِۦ ۚ فَمَنِ ٱضْطُرَّ غَيْرَ بَاغٍ وَلَا عَادٍ فَإِنَّ رَبَّكَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٤٥﴾

145. Waxaad dhahdaa kama helayo waxa lay waxyooday wax ka reebban cidda cuni oon ahayn, bakhti, dhiig butaaci, hilib doofaar, illeen waa nijaase iyo wax xun oo lagu gawracay magaca Alle waxaan ahayn, ruuxii baahda dulmi iyo xadgudub la'aan, Allehaa wuu u dambi dhaafi una naxariisan. (Hadduu baahidaa u cuno).

Aayadaha hore waxay caddayn jaahilnimadii carbeed islaamka ka hor, markay xaaraan yeeleen xoolaha qaarkood, waxaasi waa beentooda ay dooni inay dadka ku dhumiyaan, Alle na ma toosiyo daalimiinta, waxaana jiray nin la dhihi jiray Camar binu Luxayi oo dadka u horseeday waxyaalahaas, dhabtuna waa in xaaraantu tahay bakhtiga, dhiig butaaci, hilibka doofaarka, illeen waa nijaase, iyo wax xun oo lagu gowracay waxaan magaca Alle ahayn, waxay diintu u reebtay waxaasna waa xigmad wayn, oo qaarna muuqdo qaarna qarsoon yahay, wax yaalo kalana waa jiraan. **[Al-Ancaam: 143-145].**

وَعَلَى ٱلَّذِينَ هَادُوا۟ حَرَّمْنَا كُلَّ ذِى ظُفُرٍ ۖ وَمِنَ ٱلْبَقَرِ وَٱلْغَنَمِ حَرَّمْنَا عَلَيْهِمْ شُحُومَهُمَآ إِلَّا مَا حَمَلَتْ ظُهُورُهُمَآ أَوِ ٱلْحَوَايَآ أَوْ مَا ٱخْتَلَطَ بِعَظْمٍ ۚ ذَٰلِكَ جَزَيْنَٰهُم بِبَغْيِهِمْ ۖ وَإِنَّا لَصَٰدِقُونَ ﴿١٤٦﴾

146. Kuwa yuhuudda ah waxaan ka reebnay wax kastoo ciddi leh, lo'da iyo adhigana waxaan ka reebnay baruurtooda, waxay dhabarka ku qaadaan (baruurta dhabarka) mooyee, ama uur ku jirta, ama wixii ku dheehan laf, saasaana ku abaal marinnay dulmigooda dartiis, runbaanna sheegaynaa.

فَإِن كَذَّبُوكَ فَقُل رَّبُّكُمْ ذُو رَحْمَةٍ وَٰسِعَةٍ وَلَا يُرَدُّ بَأْسُهُۥ عَنِ ٱلْقَوْمِ ٱلْمُجْرِمِينَ ﴿١٤٧﴾

147. Hadday ku beeniyaan waxaad dhahdaa Allihiin waa naxariis badane lagamana celiyo ciqaabtiisa qoomka dambiilayaasha ah.

Yuhuud way kibirtay, markaasaa Alle ku ciqaabay inuu ka xarrimay hilibka waxa ciddida leh, sida geela, gorayada iyo wixii la mida, sidoo kale waxaa laga xarrimay baruurta lo'da iyo adhiga, waxa dhabarka kaga yaalla, ama uur ku jirta ku sugan ama laf ku dheehan mooyee.

Saasaana loo ciqaabaa ciddii kibirta, Alle na waa runle, hadday yuhuud iyo gaaladuna beeniyaan Nabiga, Alle waa naxariis badane ciddii toobad keenta, ciqaabtiisana wax ka celin dambiilayaasha ma jiro, yuhuudduna wataas khayaamada iyo xumaanta la joogtay.

Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Alle ha naclado yuhuud, wuxuu ka reebay baruurta, markaasay gadeen oo cuneen lacagtii (wixii laga reebay lacagtiisa). **[Al-Ancaam: 146-147].**

سَيَقُولُ ٱلَّذِينَ أَشْرَكُوا۟ لَوْ شَآءَ ٱللَّهُ مَآ أَشْرَكْنَا وَلَآ ءَابَآؤُنَا وَلَا حَرَّمْنَا مِن شَىْءٍ ۚ كَذَٰلِكَ كَذَّبَ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ حَتَّىٰ ذَاقُوا۟ بَأْسَنَا ۗ قُلْ هَلْ عِندَكُم مِّنْ عِلْمٍ فَتُخْرِجُوهُ لَنَآ ۖ إِن تَتَّبِعُونَ إِلَّا ٱلظَّنَّ وَإِنْ أَنتُمْ إِلَّا تَخْرُصُونَ ﴿١٤٨﴾

148. Waxay odhan kuwii gaaloobay hadduu Alle doono maannaan gaalowneen annaga iyo aabayowganno, waxna maannaan xarrimneen, saasayna u beeniyeen kuwii ka horreeyey intay ka dhadhamiyaan ciqaabtannada, waxaad dhahdaa agtiinna cilmi ma yahay aad noo soo bixisaan (muujisaan) waxaan malo ahayn ma raacaysaan waxaadna uun tihiin beenaalayaal.

قُلْ فَلِلَّهِ ٱلْحُجَّةُ ٱلْبَٰلِغَةُ ۖ فَلَوْ شَآءَ لَهَدَىٰكُمْ أَجْمَعِينَ ﴿١٤٩﴾

149. Waxaad dhahdaa Alle ayaa iska leh xujada wayn, hadduu doonana wuu idin hanuunin lahaa dhammaan.

قُلْ هَلُمَّ شُهَدَآءَكُمُ ٱلَّذِينَ يَشْهَدُونَ أَنَّ ٱللَّهَ حَرَّمَ هَٰذَا ۖ فَإِن شَهِدُوا۟

150. Waxaad dhahdaa keena markhaatigiinna idiin marag furi in Alle reebay kan (aad

reebteen) hadday marag furaan ha marag furin la jirkooda, hana raacin hawada kuwa beeniyey aayaadkannaga, rumayninna aakhiro, Rabbigoodna wax la sima.

فَلَا تَشْهَدْ مَعَهُمْ ۚ وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَآءَ ٱلَّذِينَ كَذَّبُوا۟ بِـَٔايَـٰتِنَا وَٱلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِٱلْـَٔاخِرَةِ وَهُم بِرَبِّهِمْ يَعْدِلُونَ ﴿١٥٠﴾

Aayadahan waxay caddayn muran iyo waxyaalo ay u xujaysan waxa xun oy fali. Iyagoo sheegi in Alle arko oo raalli ka yahay. Waana xujooyin ay sheegsheegi oon qiimo lahayn, waana male iyo been raac, Alle ayaase iska leh xujada iyo xigmada dhabta ah cidduu doonana hanuunin, wax marag ah oy u hayaan xaalkaasna ma jiro, waana in laga digtoonaado hawada kuwa beeniyey aayaadka Alle, iyo kuwaan aakhiro rumayn, oo Alle la simi waxyaalo kale, cidna xaq uma leh inay sheegato in xumaantiisa Alle ka raalli yahay, maxaa yeelay Alle caqli buu siiyey, jidkana wuu u caddeeyey, saas darteed waa in wanaagga la raaco xumaantana laga leexdo oon sababo loo daydayan, ma jirto sabab loo cuskan arrintaas, ee waa uun xumaan iyo shaydaan. **[Al-Ancaam: 148-150].**

151. Waxaad dhahdaa kaalaya aan idiin akhriyo waxa Alle idinka reebaye, waa inaydaan wax la wadaajin, labada waalidna waa inaad u samo fashaan (oydaan caasiyin) oydaan laynna caruurtiinna saboolnimo (baahi darteed) annagaa idinka iyo iyagaba arzaaqi, hana u dhawaannina xumaanta teeda muuqata iyo teeda qarsoonba, hana dilina naftii Alle reebay in xaq darro lagu dilo, saasuuna Alle idin fari inaad wax kastaan.

* قُلْ تَعَالَوْا۟ أَتْلُ مَا حَرَّمَ رَبُّكُمْ عَلَيْكُمْ ۖ أَلَّا تُشْرِكُوا۟ بِهِۦ شَيْـًٔا ۖ وَبِٱلْوَٰلِدَيْنِ إِحْسَـٰنًا ۖ وَلَا تَقْتُلُوٓا۟ أَوْلَـٰدَكُم مِّنْ إِمْلَـٰقٍ نَّحْنُ نَرْزُقُكُمْ وَإِيَّاهُمْ ۖ وَلَا تَقْرَبُوا۟ ٱلْفَوَٰحِشَ مَا ظَهَرَ مِنْهَا وَمَا بَطَنَ ۖ وَلَا تَقْتُلُوا۟ ٱلنَّفْسَ ٱلَّتِى حَرَّمَ ٱللَّهُ إِلَّا بِٱلْحَقِّ ۚ ذَٰلِكُمْ وَصَّىٰكُم بِهِۦ لَعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ ﴿١٥١﴾

152. Hana u dhawaannina xoolaha agoonta si fiican mooyee intay ka gaadhaan xooggooda, dhammaystirana miisidda iyo miisaanka, si caddaalada, kuma kallifno nafi waxayna

وَلَا تَقْرَبُوا۟ مَالَ ٱلْيَتِيمِ إِلَّا بِٱلَّتِى هِىَ أَحْسَنُ حَتَّىٰ يَبْلُغَ أَشُدَّهُۥ ۚ وَأَوْفُوا۟ ٱلْكَيْلَ وَٱلْمِيزَانَ بِٱلْقِسْطِ ۖ لَا نُكَلِّفُ نَفْسًا إِلَّا وُسْعَهَا ۖ وَإِذَا قُلْتُمْ فَٱعْدِلُوا۟

karin haddaad hadlaysaanna caddaalad fala, qaraababa ha ahaadee, oofiyana ballanka Alle, sidaasaana Alle idin faray, inaad waantoowdaan.

وَلَوْ كَانَ ذَا قُرْبَىٰ ۖ وَبِعَهْدِ ٱللَّهِ أَوْفُوا۟ ۚ ذَٰلِكُمْ وَصَّىٰكُم بِهِۦ لَعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ ﴿١٥٢﴾

153. Kaasina waa jidkayga toosan ee raaca, hana raacina wadiiqaha oo idin la kala tago (idinka leexiyo jidka Alle), saasaana Alle idin faray, inaad dhawrsataan.

وَأَنَّ هَٰذَا صِرَٰطِى مُسْتَقِيمًا فَٱتَّبِعُوهُ ۖ وَلَا تَتَّبِعُوا۟ ٱلسُّبُلَ فَتَفَرَّقَ بِكُمْ عَن سَبِيلِهِۦ ۚ ذَٰلِكُمْ وَصَّىٰكُم بِهِۦ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ ﴿١٥٣﴾

Ibnu Mascuud wuxuu yidhi: ciddii dooni inuu arko dardaarankii Rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ee korkiisa shabaddiisu ku taallay ha akhriyo aayadahan. Ibnu Cabbaasna wuxuu yidhi: suuradda ancaam waxaa ku sugan aayad sugan oo quraanka hooyo u ah, wuxuuna akhriyey aayadahan. Waxayna ka digi aayaduhu gaalnimo, waalidka oo la xumeeyo, caruurtoo baahi darteed la laayo, xumaanta oo loo dhawaado wax muuqda iyo wax qarsoon, naf xaq darra loo dilo, xoolaha agoonta oo loogu dhawaado xumaan isagoon qaangaadhin, miisidda iyo miisaanka oo la nusqaamiyo, caddaalad xumo, ballanka Alle oon la oogin, jidka shaydaanka oo la raaco.

Waana aayado la yaab leh oo kulmiyey dardaaran wayn kana digay xumaan badan.

Jidka Alle ee toosanna waa jidka xaqa ah ee quraanku fari, Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuu tusiyey, taasoo caddayn in jidka xaqa ah mid kaliya yahay, waddooyin badan oo shaydaan ugu yeedhina jiraan, oy waajib tahay in laga digtoonaado. **[Al-Ancaam: 151-153].**

154. Waxaanna siinnay Nabi Muuse kitaabkii (Tawreed) annagoo dhammaystiri waxa wanaagsan, wax walbana caddayn, isagoo hanuun iyo naxariis ah, inay la kulanka Rabbigood rumeeyaan.

ثُمَّ ءَاتَيْنَا مُوسَى ٱلْكِتَٰبَ تَمَامًا عَلَى ٱلَّذِىٓ أَحْسَنَ وَتَفْصِيلًا لِّكُلِّ شَىْءٍ وَهُدًى وَرَحْمَةً لَّعَلَّهُم بِلِقَآءِ رَبِّهِمْ يُؤْمِنُونَ ﴿١٥٤﴾

155. Kanna (quraanku) waa kitaab aan soo dejinnay oo barakaysan, ee raaca, dhawrsadana in laydiin naxariisto.

وَهَٰذَا كِتَٰبٌ أَنزَلْنَٰهُ مُبَارَكٌ فَٱتَّبِعُوهُ وَٱتَّقُوا۟ لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ ﴿١٥٥﴾

أَن تَقُولُوٓاْ إِنَّمَآ أُنزِلَ ٱلۡكِتَٰبُ عَلَىٰ طَآئِفَتَيۡنِ مِن قَبۡلِنَا وَإِن كُنَّا عَن دِرَاسَتِهِمۡ لَغَٰفِلِينَ ﴿١٥٦﴾

156. Oydaan dhihin waxaa uun kitaab lagu soo dejiyey labadii qolo ee naga horreeyey, annaguna ma naqaanno cilmigoodii.

أَوۡ تَقُولُواْ لَوۡ أَنَّآ أُنزِلَ عَلَيۡنَا ٱلۡكِتَٰبُ لَكُنَّآ أَهۡدَىٰ مِنۡهُمۡۚ فَقَدۡ جَآءَكُم بَيِّنَةٌ مِّن رَّبِّكُمۡ وَهُدٗى وَرَحۡمَةٞۚ فَمَنۡ أَظۡلَمُ مِمَّن كَذَّبَ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ وَصَدَفَ عَنۡهَاۗ سَنَجۡزِي ٱلَّذِينَ يَصۡدِفُونَ عَنۡ ءَايَٰتِنَا سُوٓءَ ٱلۡعَذَابِ بِمَا كَانُواْ يَصۡدِفُونَ ﴿١٥٧﴾

157. Ama aydaan dhihin haddii nalagu soo dejiyo kitaab waxaan ahaan lahayn kuwo ka hanuunsan iyaga, waxaa idiinka yimid xujo (cad) xagga Allihiin, iyo hanuun, iyo naxariis, cid ka dulmi badanna ma jirto mid beenisay aayaadka Alle oo ka jeedsatay, waxaannu ku abaal marin kuwa ka jeedsada aayaadkannaga cadaab xun jeedsigooda dartiis.

Halkan Alle wuxuu ku sheegay ammaanta tawreed iyo kitaabka quraanka ah ee barakaysan, oy waajib tahay in la raaco, lana dhawrsado si naxariista Alle loo muto, aayadaha kalana waxay caddayn in quraanka la soo dejiyey si aan loo calaacalin, oon loo dhihin kuwii naga horreeyey waxaa la siiyey kitaab anagana wax ma naqaanno, ama ayna u dhihin haddii kitaab nalagu soo dejiyo annagaa ka hanuunsanaan lahayn, markaasuu Alle u sheegay in xujo iyo hanuun Alle u yimid iyo naxariis, cid ka dulmi badanna uusan jirin ruux beeniyey aayaadka Alle oo ka jeedsaday, waxaana lagu abaal marin kuwaas cadaab xun, jeedsigooda dartiis. Aayaduhuna waxay caddayn inaan cidna xujo u haysan beeninta xaqa illeen kitaab xaq ah oo wax walba caddeeyey yaa Alle u soo dejiyeye, kaasoo mudan in la raaco oo lagu dhaqmo, looguna yeedho wanaaggiisa. **[Al-Ancaam: 154-157].**

هَلۡ يَنظُرُونَ إِلَّآ أَن تَأۡتِيَهُمُ ٱلۡمَلَٰٓئِكَةُ أَوۡ يَأۡتِيَ رَبُّكَ أَوۡ يَأۡتِيَ بَعۡضُ ءَايَٰتِ رَبِّكَۗ يَوۡمَ يَأۡتِي بَعۡضُ ءَايَٰتِ رَبِّكَ لَا يَنفَعُ نَفۡسًا إِيمَٰنُهَا لَمۡ تَكُنۡ ءَامَنَتۡ مِن قَبۡلُ أَوۡ كَسَبَتۡ فِيٓ إِيمَٰنِهَا خَيۡرٗاۗ قُلِ ٱنتَظِرُوٓاْ إِنَّا مُنتَظِرُونَ ﴿١٥٨﴾

158. Ma waxay sugayaan in malaa'igtu u timaado, ama Alle u yimaado ama u yimaaddaan aayadaha Allehaa qaarkood, maalintay u imaan aayadaha Allehaa qaarkood wax uma tarto naf rumayn iyadoon horay u rumayn ama aan ku kasban

iimankeeda khayr, waxaad dhahdaa suga annaguna waannu sugaynaa.

إِنَّ ٱلَّذِينَ فَرَّقُواْ دِينَهُمۡ وَكَانُواْ شِيَعٗا لَّسۡتَ مِنۡهُمۡ فِي شَيۡءٍۚ إِنَّمَآ أَمۡرُهُمۡ إِلَى ٱللَّهِ ثُمَّ يُنَبِّئُهُم بِمَا كَانُواْ يَفۡعَلُونَ ١٥٩

159. Kuwa ku kala tagay diintooda oo noqday kooxo, ka mid ma tihid, amarkoodana Alle umbaa iska leh, markaasuu uga warrami waxay falayeen.

مَن جَآءَ بِٱلۡحَسَنَةِ فَلَهُۥ عَشۡرُ أَمۡثَالِهَاۖ وَمَن جَآءَ بِٱلسَّيِّئَةِ فَلَا يُجۡزَىٰٓ إِلَّا مِثۡلَهَا وَهُمۡ لَا يُظۡلَمُونَ ١٦٠

160. Ciddii la timaadda wanaag wuxuu mudan toban la mid ah, ciddii la timaadda xumaanna waxaa laga abaal mariyaa mid la mid ah, lamana dulmiyo.

Halkan wuxuu Alle ugu goodiyi gaalada xaqa beenisay, maalintay imaanayaan aayadaha Alle qaarkood, (waana qorraxdoo galbeed ka soo baxda), wax rumayna oo laga aqbali ma jirto, haddaan horay xaqa loo rumeyn, ama khayr horay loo kasban, ha sugeen gaaladu muslimiintuna way sugiye, kuwa ku kala tagay diintana Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korikiisa ha yeelee) waxba kama dhexeeyo, amarkoodana Alle ayaa iska leh, aayadduna waxay ka digi ku kala tagga diinta iyo iskhilaafka mar hadduu xaqu cad yahay mid kaliyana yahay, waana ka Nabiga lagu khatimay Nabiyadii horana haysteen.

Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: haddaan Nabiyada nahay diintanadu waa mid kaliya. Kala tag, iskhilaaf, iyo kooxo kooxana ma oggola diinta islaamku, Alle waa kali, dadkuna waa addoomadiisa, xaquna waa mid, markaas maxaa loo kala tegi.

Tan kale ciddii wanaag fasha waa loo toban laabi, xumaantuna waa hal kaliya, cid la dulminna ma jirto, taasina waa naxariista Alle iyo fadligiisa uu u naxariisan addoomadiisa illeen waa naxariistee. **[Al-Ancaam: 158-160].**

قُلۡ إِنَّنِي هَدَىٰنِي رَبِّيٓ إِلَىٰ صِرَٰطٖ مُّسۡتَقِيمٖ دِينٗا قِيَمٗا مِّلَّةَ إِبۡرَٰهِيمَ حَنِيفٗاۚ وَمَا كَانَ مِنَ ٱلۡمُشۡرِكِينَ ١٦١

161. Waxaad dhahdaa wuxuu igu hanuuniyey Rabbigay jid toosan diin sugan oo ah diintii (Nabi) Ibraahim, isagoo toosan, oon gaalada ka mid ahayn.

قُلۡ إِنَّ صَلَاتِي وَنُسُكِي وَمَحۡيَايَ وَمَمَاتِي لِلَّهِ رَبِّ ٱلۡعَٰلَمِينَ ١٦٢

162. Waxaad dhahdaa salaaddayda, waxaan gawrici, noloshayda iyo geeridaydaba Alle ayaa iska leh, Rabbiga caalamka ah.

لَا شَرِيكَ لَهُۥۖ وَبِذَٰلِكَ أُمِرْتُ وَأَنَا۠ أَوَّلُ ٱلْمُسْلِمِينَ ﴿١٦٣﴾

163. Wax la wadaagana ma jiro (arrimahaas), saasaana lay faray anigaana ugu horreeya muslimiinta (ummaddan).

قُلْ أَغَيْرَ ٱللَّهِ أَبْغِى رَبًّا وَهُوَ رَبُّ كُلِّ شَىْءٍۚ وَلَا تَكْسِبُ كُلُّ نَفْسٍ إِلَّا عَلَيْهَاۚ وَلَا تَزِرُ وَازِرَةٌ وِزْرَ أُخْرَىٰۚ ثُمَّ إِلَىٰ رَبِّكُم مَّرْجِعُكُمْ فَيُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمْ فِيهِ تَخْتَلِفُونَ ﴿١٦٤﴾

164. Waxaad dhahdaa ma wax Ilaah ka soo hadhay yaan Alle ka dooni (dhigan) isagoo Ilaahay wax walba Rabbi u ah, naf kastana waxay kasbato waa uun korkeeda, nafna dambi naf kale ma qaaddo, xagga Allihiin umbaana laydiin celin, wuxuuna idiinka warrami waxaad isku diidanaydeen.

وَهُوَ ٱلَّذِى جَعَلَكُمْ خَلَٰٓئِفَ ٱلْأَرْضِ وَرَفَعَ بَعْضَكُمْ فَوْقَ بَعْضٍ دَرَجَٰتٍ لِّيَبْلُوَكُمْ فِى مَآ ءَاتَىٰكُمْۗ إِنَّ رَبَّكَ سَرِيعُ ٱلْعِقَابِ وَإِنَّهُۥ لَغَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٦٥﴾

165. Alle na waa kan idinka yeelay kuwo dhulka u hadhay, qaarkiinna qaar ka sara mariyey darajooyin, inuu idinku imtixaamo wuxuu idin siiyay, Alle na waa deg degtaa ciqaabtiisu waana dambi dhaafe naxariista.

Halkanna wuxuu Alle faray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu sheego inuu ku toosan yahay diin fiican oon qallooc lahayn, oo ah diintii Nabi Ibraahimkii toosnaa, iyo salaadda, camalka iyo gawraca, noloshooda iyo geeridoodaba Alle iska leeyahay ee wax lawadaagaa uusan jirin, Nabiguna waa imaamka ummaddan iyo mu'miniinta oo dhan, waxaan Alle ahaynna Alle lagama dhigto illeen isagaa wax walba Alle u ahe. Naf walbana waxay kasbatay iyadaa ka masuula, nafna naf kale dambigeeda ma qaaddo, dhammaanna Alle ayaa loo noqon, caddaynna wixii laysku diidanaa, waana kan inaga yeelay kuwa camira dhulka oo ku noolaada, kalana duway dadka oo ka yeelay mid cilmi leh, mid jaahil ah, mid xoola leh, mid saboola, mid Alle ka yaabi, mid kale iyo wax la mida, imtixaan dartiis. Alle na waa deg degtaa ciqaabtiisu waana dambi dhaafe naxariista, suuradduna waxay ku dhammaatay cabsi galin iyo rajo galin oo ah sida quraanka ku badan, si aan laysu illoobin, ama looga quusanin naxariista Alle. **[Al-Ancaam: 161-165].**

Suurat Al-Acraaf

سُورَةُ الأَعۡرَافِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. (Waxay ku tusin mucjisada quraanka).

الٓمٓصٓ ﴿١﴾

2. Kani waa kitaab aannu kuu soo dejinnay ee yeyna laabtaada dhibi (cidhiidhi) ahaan, si aad ugu digto (gaalada), waana waanada mu'miniinta.

كِتَٰبٌ أُنزِلَ إِلَيۡكَ فَلَا يَكُن فِي صَدۡرِكَ حَرَجٞ مِّنۡهُ لِتُنذِرَ بِهِۦ وَذِكۡرَىٰ لِلۡمُؤۡمِنِينَ ﴿٢﴾

3. Raaca waxa laydiinka soo dejiyey xagga Alle, hana raacina wax ka soo hadhay oo awliyo ah (gargaara ah), yaraana intaad waantoobaysaan.

ٱتَّبِعُواْ مَآ أُنزِلَ إِلَيۡكُم مِّن رَّبِّكُمۡ وَلَا تَتَّبِعُواْ مِن دُونِهِۦٓ أَوۡلِيَآءَۗ قَلِيلٗا مَّا تَذَكَّرُونَ ﴿٣﴾

4. Badanaa intaan magaalo halaagnay oo u timid ciqaabtannadii iyadoo jiifta (habeen) ama qayluushan (maalin).

وَكَم مِّن قَرۡيَةٍ أَهۡلَكۡنَٰهَا فَجَآءَهَا بَأۡسُنَا بَيَٰتًا أَوۡ هُمۡ قَآئِلُونَ ﴿٤﴾

5. Baryadoodu (qayladooduna) markuu u yimid halaaggannagu ma ahayn waxaan ahayn inay dhahaan annagaa daalimiin ahayn.

فَمَا كَانَ دَعۡوَىٰهُمۡ إِذۡ جَآءَهُم بَأۡسُنَآ إِلَّآ أَن قَالُوٓاْ إِنَّا كُنَّا ظَٰلِمِينَ ﴿٥﴾

6. Waana warsanaynaa kuwii loo diray (ummadihii waxay ku jawaabeen) waana warsanaynaa kuwii la diray (rasuulladii inay gaadhsiiyeen).

فَلَنَسْـَٔلَنَّ ٱلَّذِينَ أُرْسِلَ إِلَيْهِمْ وَلَنَسْـَٔلَنَّ ٱلْمُرْسَلِينَ ٦

7. Waana uga warramaynaa ogaansho, mana aannaan ka maqnayn.

فَلَنَقُصَّنَّ عَلَيْهِم بِعِلْمٍ ۖ وَمَا كُنَّا غَآئِبِينَ ٧

Kitaabka quraanka ah waa kitaab xaq ah oo Nabiga lagu soo dejiyey si uu dadka ugu digo, mana aha inuu cidhiidhi ku galo, waana waanada mu'miniinta, waana in la raaco quraankan Alle soo dejiyey, mana aha in la raaco xukun Alle xukunkiisa ka soo hadhay, wax waano qaadanna waa yar yahay.

Immisaa la halaagay magaalo goor habeena ama maalin, markaasna ku qaylyeen inay daalimiin ahaayeen, Alle na wuu warsan umadaha waxay ugu jawaabeen Nabiyada, rasuulladana waxaa la warsan inay gaadhsiiyeen xaqii, Alle na wax walba waa og yahay wax ka qarsoonna ma jiro illeen Alle inagama maqnee, Rasuulkana (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: dhammaantiin waxaad tihiin ilaaliye dhammaantiinna waa laydin warsan. **[Al-Acraaf: 1-7].**

8. Miisaanku waa xaq maalintaas (qiyaamada) cidday cuslaato miisaankiisa (fiican) kuwaasu waa uun kuwa liibaanay.

وَٱلْوَزْنُ يَوْمَئِذٍ ٱلْحَقُّ ۚ فَمَن ثَقُلَتْ مَوَٰزِينُهُۥ فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْمُفْلِحُونَ ٨

9. Cidduu fududaado miisaankiisuna kuwaasuna waa kuwa khasaariyey naftooda, dulmigay ku falayeen aayaadkanaga dartiis.

وَمَنْ خَفَّتْ مَوَٰزِينُهُۥ فَأُو۟لَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ خَسِرُوٓا۟ أَنفُسَهُم بِمَا كَانُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا يَظْلِمُونَ ٩

10. Waxaan idin makaninnay dhulka, waxaanna idiinka yeellay meel lagu noolaado, waxaase yar intaad shukriyeysaan.

وَلَقَدْ مَكَّنَّٰكُمْ فِى ٱلْأَرْضِ وَجَعَلْنَا لَكُمْ فِيهَا مَعَٰيِشَ ۗ قَلِيلًا مَّا تَشْكُرُونَ ١٠

11. Waan idin abuurray (Nabi Aadan) waana idin suuraynay, markaasaan ku nidhi malaa'igta

وَلَقَدْ خَلَقْنَٰكُمْ ثُمَّ صَوَّرْنَٰكُمْ ثُمَّ قُلْنَا لِلْمَلَٰٓئِكَةِ ٱسْجُدُوا۟ لِـَٔادَمَ

u sujuuda (Nabi) Aadam (salaan) wayna sujuudeen, ibliis se kama mid ahayn kuwa sujuuda.

فَسَجَدُوٓاْ إِلَّآ إِبۡلِيسَ لَمۡ يَكُن مِّنَ ٱلسَّٰجِدِينَ ﴿١١﴾

12. Wuxuu yidhi (Alle): maxaa kaa reebay inaad sujuuddo markaan ku faray, wuxuu yidhi anaa ka khayr roon, waxaad iga abuurtay dab isagana waxaad ka abuurtay dhoobo.

قَالَ مَا مَنَعَكَ أَلَّا تَسۡجُدَ إِذۡ أَمَرۡتُكَۖ قَالَ أَنَا۠ خَيۡرٞ مِّنۡهُ خَلَقۡتَنِي مِن نَّارٖ وَخَلَقۡتَهُۥ مِن طِينٖ ﴿١٢﴾

Alle wa caadil, wuxuuna oogi qiyaamada miisaan xaq ah, ciddii khayrkeedu badnaadana waa liibaantay, tii khayrkeedu yaraadana way khasaartay isagaana dulmi falay, markaasuu Alle xusuusiyey addoomadiisa siduu ugu nicmeeyey, dhulkana ugu sugay una makaniyey, wayse shukri yar yihiin, markaasuu haddana xusuusiyey siduu u sharrifay aabahood Nabi Aadam, malaa'igtana u faray inay qaddariso, wayna yeeleen oo faleen wuxuu Alle faray, ibliis se isagu wuu diiday inuu wayneeyo Nabi Aadam, wuuna xasday wuxuuna sheegay inuu isagu ka fiican yahay, illeen dab baa laga abuuray, Nabi Aadamna dhoobee, waana qiyaas beena oo xun.

Cid kastoo nasab, dhalasho, iyo asal si xun ugu faanta oo xaqa ku diiddana ibliis baa bare iyo hoggaamiye u ah, dadkuna waxay ku kala fiican yihiin Alle ka yaabid, wanaagga, sharafta iyo akhlaaqda fiican ee wax tarka ah, mase aha waxaan ahay hebel. **[Al-Acraaf: 8-12].**

13. Wuxuu yidhi (Alle) ka dego xaggeeda (jannada) xaq uma lihid inaad isku dhex kibriside, bax waxaad ka mid tahay kuwa dullaysane.

قَالَ فَٱهۡبِطۡ مِنۡهَا فَمَا يَكُونُ لَكَ أَن تَتَكَبَّرَ فِيهَا فَٱخۡرُجۡ إِنَّكَ مِنَ ٱلصَّٰغِرِينَ ﴿١٣﴾

14. Wuxuu yidhi ii sug tan iyo maalinta la soo bixin

قَالَ أَنظِرۡنِيٓ إِلَىٰ يَوۡمِ يُبۡعَثُونَ ﴿١٤﴾

15. Wuxuu yidhi (Alle) waxaad ka mid tahay kuwa la sugi.

قَالَ إِنَّكَ مِنَ ٱلۡمُنظَرِينَ ﴿١٥﴾

16. Wuxuu yidhi i baadiyeyntaada darteed waxaan u fadhiisan jidkaaga toosan (waan dhumin).

قَالَ فَبِمَآ أَغۡوَيۡتَنِي لَأَقۡعُدَنَّ لَهُمۡ صِرَٰطَكَ ٱلۡمُسۡتَقِيمَ ﴿١٦﴾

17. Waxaanna kaga iman hortooda, gadaashooda, midigta iyo bidixda mana helaysid badankooda oo shugriyi.

18. Wuxuu yidhi Alle ka bax xaggeeda adoo caayan oo la dheereeyey, ciddii ku raacdana waxaa laga buuxin jahannamo dhammaantiin.

ثُمَّ لَآتِيَنَّهُم مِّنۢ بَيۡنِ أَيۡدِيهِمۡ وَمِنۡ خَلۡفِهِمۡ وَعَنۡ أَيۡمَٰنِهِمۡ وَعَن شَمَآئِلِهِمۡۖ وَلَا تَجِدُ أَكۡثَرَهُمۡ شَٰكِرِينَ ١٧

قَالَ ٱخۡرُجۡ مِنۡهَا مَذۡءُومٗا مَّدۡحُورٗاۖ لَّمَن تَبِعَكَ مِنۡهُمۡ لَأَمۡلَأَنَّ جَهَنَّمَ مِنكُمۡ أَجۡمَعِينَ ١٨

Alle wuxuu amray ibliis inuu ka baxo jannada Alle agteeda, illeen kuma habboona Alle agtiisa isku kibrine, wuxuuna faray inuu baxo isagoo dullaysan, wuxuuse Alle warsaday in la sugo tan iyo qiyaamada, wuxuuna u ballanqaaday in la sugi tan iyo maalintaas, wuxuuna ku dhaartay ibliis inuu dhumiyo dadka kana leexiyo jidka toosan, dhan walbana uga imaan, una qurxin adduunka, wuxuuna Alle ugu jawaabay bax adoo ceeb leh oo caayan lana fogeeyey, jahannamana laydinka buuxin adiga iyo inta ku racdaba.

Ibliisna saasuu col ugu yahay dadka ayna waajib tahay in laga digtoonaado. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: shaydaan wuxuu u fadhiistay dadka jidka wuxuuna ka reebay islaamidda, hijrada, iyo jahaadka wayna khilaafeen oo faleen khayrkii, ciddii saas yeesha oo si kasta u dhimata jannaday gali. Waxaana wariyey Imaamu Axmed. **[Al-Acraaf: 13-18].**

19. Nabi Aadamow dega adiga iyo haweenaydaadu jannada, kana cuna meeshaad doontaan, hana u dhawaannina geedkan, ood noqotaan daalimiin.

20. Waxaana waswaasiyey shaydaan, inuu ka muujiyo xaggooda wixii laga asturay oo cawradooda ah, wuxuuna yidhi wuxuu idinka reebay Rabbigiin geedkan inaydaan noqonnin malaa'ig, ama aydaan waarin.

21. Wuxuuna ugu dhaartay inaan idiin ahay naseex.

وَيَٰٓـَٔادَمُ ٱسۡكُنۡ أَنتَ وَزَوۡجُكَ ٱلۡجَنَّةَ فَكُلَا مِنۡ حَيۡثُ شِئۡتُمَا وَلَا تَقۡرَبَا هَٰذِهِ ٱلشَّجَرَةَ فَتَكُونَا مِنَ ٱلظَّٰلِمِينَ ١٩

فَوَسۡوَسَ لَهُمَا ٱلشَّيۡطَٰنُ لِيُبۡدِيَ لَهُمَا مَا وُۥرِيَ عَنۡهُمَا مِن سَوۡءَٰتِهِمَا وَقَالَ مَا نَهَىٰكُمَا رَبُّكُمَا عَنۡ هَٰذِهِ ٱلشَّجَرَةِ إِلَّآ أَن تَكُونَا مَلَكَيۡنِ أَوۡ تَكُونَا مِنَ ٱلۡخَٰلِدِينَ ٢٠

وَقَاسَمَهُمَآ إِنِّي لَكُمَا لَمِنَ ٱلنَّٰصِحِينَ ٢١

22. Wuuna soo dejiyey dhagar darteed, markay dhadhamiyeen geedka waxaa u muuqday xumaantooda waxayna ahaayeen kuwo isku dhadhajiya caleenta jannada, waxaana u yeedhay Rabbigood miyaanan idinka reebin geeddan, oonan idinku odhan shaydaanku wuxuu idiin yahay col cad.

فَدَلَّىٰهُمَا بِغُرُورٍ ۚ فَلَمَّا ذَاقَا ٱلشَّجَرَةَ بَدَتْ لَهُمَا سَوْءَٰتُهُمَا وَطَفِقَا يَخْصِفَانِ عَلَيْهِمَا مِن وَرَقِ ٱلْجَنَّةِ ۖ وَنَادَىٰهُمَا رَبُّهُمَآ أَلَمْ أَنْهَكُمَا عَن تِلْكُمَا ٱلشَّجَرَةِ وَأَقُل لَّكُمَآ إِنَّ ٱلشَّيْطَٰنَ لَكُمَا عَدُوٌّ مُّبِينٌ ﴿٢٢﴾

23. Waxayna dheheen Allow waxaan dulminnay naftannada haddaadan noo dambi dhaafin oodan noo naxariisanna waxaan ahaanaynaa kuwo khasaaray.

قَالَا رَبَّنَا ظَلَمْنَآ أَنفُسَنَا وَإِن لَّمْ تَغْفِرْ لَنَا وَتَرْحَمْنَا لَنَكُونَنَّ مِنَ ٱلْخَٰسِرِينَ ﴿٢٣﴾

Ilaaheen wuxuu ina xusuusin siduu ugu nicmeeyey Aadam iyo Xaawo, jannadana u dejiyey, una banneeyey inay nicmadeeda cunaan marka laga reebo hal geed, waxaase xasday shaydaan, wuuna khayaamay isagoo u dhaartay inuu nasteex u yahay, markay geedkii wax ka cuneenna darajadii ka dhacday, cawradiina muuqatay, Alle na xusuusiyey inuu shaydaan uga digay una caddeeyey inuu col idiin yahay, markaasay calaacaleen oo qirteen gafkoodii Alle na naxariis warsadeen, taasina waxay ku tusin tabar yarida dadka iyo khaldami ogiddiisa, iyo wax badso jacaylka. Inkastoo loo nicmeeyo, iyo colnimada ibliis iyo khayaamadiisa, iyo in laga digtoonaado cid kasta oo nasteex iska dhigi haba dhaartee, illeen cid kastoo dhaaratay run ma sheegaysee, iyo in dambigu ceebta muujin, kuna kashifi, waase in Alle la magan galo, laguna xidhnaado. **[Al-Acraaf: 19-23].**

24. Wuxuu yidhi Alle ka dega qaarkiin qaarbuu col u yahaye, waxaana dhulka idiinku sugan nagaadi iyo raaxo tan iyo muddo.

قَالَ ٱهْبِطُوا۟ بَعْضُكُمْ لِبَعْضٍ عَدُوٌّ ۖ وَلَكُمْ فِى ٱلْأَرْضِ مُسْتَقَرٌّ وَمَتَٰعٌ إِلَىٰ حِينٍ ﴿٢٤﴾

25. Wuxuuna yidhi Alle dhexdiisaad ku noolaanaysaan dhexdiisaana ku dhimanaysaan xaggiisaana laydinka soo bixin.

قَالَ فِيهَا تَحْيَوْنَ وَفِيهَا تَمُوتُونَ وَمِنْهَا تُخْرَجُونَ ﴿٢٥﴾

26. Banii Aadamow waxaan idiin soo dejinay dhar astura xumaantiinna (cawrada) iyo labbis (xarrago), dharka dhawrsashada yaase khayr roon, kaasina waa aayaadka Alle inay dadku wax xusuustaan.

يَٰبَنِيٓ ءَادَمَ قَدۡ أَنزَلۡنَا عَلَيۡكُمۡ لِبَاسٗا يُوَٰرِي سَوۡءَٰتِكُمۡ وَرِيشٗاۖ وَلِبَاسُ ٱلتَّقۡوَىٰ ذَٰلِكَ خَيۡرٞۚ ذَٰلِكَ مِنۡ ءَايَٰتِ ٱللَّهِ لَعَلَّهُمۡ يَذَّكَّرُونَ ٢٦

27. Banii Aadamow yuusan idin fidnayn shaydaan siduu uga soo bixiyey labadiinnii waalid jannada, isagoo ka siibi dharkoodii inuu tusiyo xumaantooda (cawrada), wuu idin arkaa isaga iyo colkiisu idinkuse ma aragtaan, waxaana uga yeellay shaydaanka sokeeye kuwaan rumeynin xaqa.

يَٰبَنِيٓ ءَادَمَ لَا يَفۡتِنَنَّكُمُ ٱلشَّيۡطَٰنُ كَمَآ أَخۡرَجَ أَبَوَيۡكُم مِّنَ ٱلۡجَنَّةِ يَنزِعُ عَنۡهُمَا لِبَاسَهُمَا لِيُرِيَهُمَا سَوۡءَٰتِهِمَآۗ إِنَّهُۥ يَرَىٰكُمۡ هُوَ وَقَبِيلُهُۥ مِنۡ حَيۡثُ لَا تَرَوۡنَهُمۡۗ إِنَّا جَعَلۡنَا ٱلشَّيَٰطِينَ أَوۡلِيَآءَ لِلَّذِينَ لَا يُؤۡمِنُونَ ٢٧

Wuxuu faray Alle inay ka baxaan jannada iyagoo qaarkood qaar col u yahay, iyagoo dhulka ku nagaan tan iyo muddo, oy kuna noolaan dhexdiisa kuna dhiman lagana soo bixin, markaasuu Alle uga warramay dadka wuxuu ugu nicmeeyey oo dhar ay isku asturaana iyo mid xarrago, waxaase ka khayr roon dhawrsoonida si ay u xusuustaan, wuxuuna uga digay inuu fidmeeyo shaydaanku siduu waalidkood Aadam iyo xaawa uga saaray jannada, isagoo ka siibay dharkoodii, waxaana jira inuu shaydaanku u jeedo dadka iyaguse ayan arkayn, shaydaankuna wuxuu saaxiib la yahay kuwaan rumaynin xaqa. Waxayna aayaduhu caddayn siduu shaydaan dadka col ugu yahay, iyo inay ka digtoonaadaan, iyo inay xusuustaan sida Alle u arrad bixiyey uguna soo dejiyey dhar ay isku asturaan, waxaase muuqda in dadka qaarkiis jecel yahay isqaawinta, sida haweenka dharka gaabsaday iyo kuwa xidhay dharka khafiifka ah ee aan wax asturayn, taasoo ku tusin inta diidday shukriga nicmada Alle. **[Al-Acraaf: 24-27].**

28. Markay falaan xumaanna waxay dhahaan waxaan ka hellay aabayaalkanno Alle ayaana na faray iyada, waxaad dhahdaa Alle ma faro xumaan ma waxaad ku dhahaysaan Alle waxaydaan ogayn.

وَإِذَا فَعَلُواْ فَٰحِشَةٗ قَالُواْ وَجَدۡنَا عَلَيۡهَآ ءَابَآءَنَا وَٱللَّهُ أَمَرَنَا بِهَاۗ قُلۡ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَأۡمُرُ بِٱلۡفَحۡشَآءِۖ أَتَقُولُونَ عَلَى ٱللَّهِ مَا لَا تَعۡلَمُونَ ٢٨

29. Waxaad dhahdaa wuxuu faraa Alle cadaaladda iyo inaad u jeedisaan wajigiinna (xaggiisa) masaajid kasta agtiisa, baryana idinkoo u kali yeeli diinta siduu idinku bilaabay yaad ku soo noqonaysaan.

قُلْ أَمَرَ رَبِّي بِٱلْقِسْطِ ۖ وَأَقِيمُوا۟ وُجُوهَكُمْ عِندَ كُلِّ مَسْجِدٍ وَٱدْعُوهُ مُخْلِصِينَ لَهُ ٱلدِّينَ ۚ كَمَا بَدَأَكُمْ تَعُودُونَ ﴿٢٩﴾

30. Koox wuu hanuuniyey, kooxna waxaa ku sugnaaday korkooda baadi, maxaa yeelay waxay ka yeesheen shayaadiinta awliyo, waxayna u malayn inay hanuunsan yihiin.

فَرِيقًا هَدَىٰ وَفَرِيقًا حَقَّ عَلَيْهِمُ ٱلضَّلَٰلَةُ ۚ إِنَّهُمُ ٱتَّخَذُوا۟ ٱلشَّيَٰطِينَ أَوْلِيَآءَ مِن دُونِ ٱللَّهِ وَيَحْسَبُونَ أَنَّهُم مُّهْتَدُونَ ﴿٣٠﴾

Waxaana wax lala yaaba ah in markay gaaladu xumaan falaan sheegaan inay aabayaalkood ka soo gaadheen, Alle na faray sidaas, Allese ma faro xumaan, mana habboona in Alle lagu been abuurto.

Alle se wuxuu faraa cadaaladda, salaad dar Alle ah, waxaana jirta inuu Alle dadka u soo celin siduu ku billaabay, Alle wuxuu hanuuniyaa qaar, qaarna way dhumaan, maxaa yeelay shaydaan yey sokeeye ka yeesheen Alle ka sokow iyagoo isu malayn inay hanuunsan yihiin, mana habboona in cidna xumaanta lagu raaco ama aabbo ha ahaado ama cid kale ha ahaatee.

Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuuu yidhi: dadow waxaa laydiin soo kulmin Alle idinkoo kaba la', qaawan, oon gudnayn, Alle ayaa yidhi: saan ku billownay yaan ku soo celinaynaa (Bukhaari iyo Muslim). **[Al-Acraaf: 28-30].**

31. Banii Aadamow qaata quruxdiinna (dharka) masaajid kasta agtiisa, cuna oo cabbana hana xad gudbina illeen Alle ma jecla kuwa xadgudbee.

* يَٰبَنِىٓ ءَادَمَ خُذُوا۟ زِينَتَكُمْ عِندَ كُلِّ مَسْجِدٍ وَكُلُوا۟ وَٱشْرَبُوا۟ وَلَا تُسْرِفُوٓا۟ ۚ إِنَّهُۥ لَا يُحِبُّ ٱلْمُسْرِفِينَ ﴿٣١﴾

32. Waxaadna dhahdaa yaa reebay quruxdii Alle u soo bixiyey addoomadiisa, iyo wanaagga rizqiga ah, waxaad dhahdaa waxaa iska leh kuwa rumeeyey nolosha adduunyo dhexdeeda, gaarna u tahay maalinta

قُلْ مَنْ حَرَّمَ زِينَةَ ٱللَّهِ ٱلَّتِىٓ أَخْرَجَ لِعِبَادِهِۦ وَٱلطَّيِّبَٰتِ مِنَ ٱلرِّزْقِ ۚ قُلْ هِىَ لِلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ فِى ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا خَالِصَةً يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ ۗ كَذَٰلِكَ نُفَصِّلُ ٱلْءَايَٰتِ لِقَوْمٍ يَعْلَمُونَ ﴿٣٢﴾

qiyaame, saasaanna ugu caddaynay aayaadkannaga ciddii wax og.

33. Waxaad dhahdaa wuxuu uun xarrimay Rabbigey waxa xun kan muuqda iyo kan qarsoonba, iyo dambiga, iyo xad gudub xaq darro iyo inaad la wadaajisaan Alle wuxuusan xujo u soo dejinin, iyo inaad ku sheegtaan Alle waxaydaan ogayn «xaqnimadiisa».

قُلْ إِنَّمَا حَرَّمَ رَبِّيَ ٱلْفَوَٰحِشَ مَا ظَهَرَ مِنْهَا وَمَا بَطَنَ وَٱلْإِثْمَ وَٱلْبَغْىَ بِغَيْرِ ٱلْحَقِّ وَأَن تُشْرِكُوا۟ بِٱللَّهِ مَا لَمْ يُنَزِّلْ بِهِۦ سُلْطَٰنًا وَأَن تَقُولُوا۟ عَلَى ٱللَّهِ مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿٣٣﴾

Waa in cawrada la asturo marka la cibaadaysan iyo mar walba. Waxna la cuno lana cabbo isagoon la xadgudbayn. Illeen Alle ma jecla kuwa xadgudbee, cid xarrimi kartana ma jirto quruxda iyo wanaagga risqiga ah ee Alle u soo saaray dadka, wanaagga waxaa mudan mu'mininta adduunka, gaar buuna u yahay qiyaamada, saasuuna Alle ugu caddeeyey aayaadkiisa ciddii wax kasi, Alle wuxuu xarrimaa xumaanta mid muuqata iyo mid qarsoonba iyo dambiga, iyo dulmiga xaq darro iyo in Alle lala wadaajiyo waxaan xujo lahayn iyo in lagu sheego Alle waxaan loo cilmi lahayn. Aayaduhuna waxay ku tusin in wanaaggana la falo xumaantana laga fogaado. **[Al-Acraaf: 31-33].**

34. Ummad kasta waxaa u sugnaaday ajal (muddo) markay timaaddo ajashuna kama dib maraan saacad kamana hor maraan.

وَلِكُلِّ أُمَّةٍ أَجَلٌ ۖ فَإِذَا جَآءَ أَجَلُهُمْ لَا يَسْتَأْخِرُونَ سَاعَةً وَلَا يَسْتَقْدِمُونَ ﴿٣٤﴾

35. Banii Aadamow hadday idiin yimaadaan rasuullo idinka mida oo idiinka warrama aayaadkayga ciddiise dhawrsata oo wanaag fasha, cabsi ma saarra mana walbahaaraan.

يَٰبَنِىٓ ءَادَمَ إِمَّا يَأْتِيَنَّكُمْ رُسُلٌ مِّنكُمْ يَقُصُّونَ عَلَيْكُمْ ءَايَٰتِى فَمَنِ ٱتَّقَىٰ وَأَصْلَحَ فَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿٣٥﴾

36. Kuwa beeniyey aayaadkannaga oo iska kibriya xaggeeda kuwaasi waa naarta ehelkeeda wayna ku waari.

وَٱلَّذِينَ كَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا وَٱسْتَكْبَرُوا۟ عَنْهَآ أُو۟لَٰٓئِكَ أَصْحَٰبُ ٱلنَّارِ ۖ هُمْ فِيهَا خَٰلِدُونَ ﴿٣٦﴾

فَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنِ ٱفْتَرَىٰ عَلَى ٱللَّهِ كَذِبًا
أَوْ كَذَّبَ بِـَٔايَـٰتِهِۦٓ ۚ أُو۟لَـٰٓئِكَ يَنَالُهُمْ
نَصِيبُهُم مِّنَ ٱلْكِتَـٰبِ ۖ حَتَّىٰٓ إِذَا جَآءَتْهُمْ
رُسُلُنَا يَتَوَفَّوْنَهُمْ قَالُوٓا۟ أَيْنَ مَا كُنتُمْ
تَدْعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ ۖ قَالُوا۟ ضَلُّوا۟
عَنَّا وَشَهِدُوا۟ عَلَىٰٓ أَنفُسِهِمْ أَنَّهُمْ كَانُوا۟
كَـٰفِرِينَ ﴿٣٧﴾

37. Yaa ka dulmi badan cid ku abuuratay Alle been ama beenisa aayaadkiisa, kuwaasu waxay heli qaybtoodii loo qoray, markay u timaaddo malaa'igtannada (mawdka) oo dili waxay ku dhahaan aaway waxaad caabudayseen Alle ka sokow waxay dhahaan way naga dhumeen, waxayna ku marag fureen naftooda inay ahaayeen gaalo.

Alle wuxuu u yeelay ummad kasta waqti ayna kana dib dhacayn kana hor marayn, wuxuuna uga digay khilaafidda rasuulladiisa, taasoo ah in ciddii dhawrsata oo wanaag fasha ayan cabsi iyo murug midna arkayn, ciddiise beenisa aayaadka Alle oo iskibrisana ay naar gali kuna waari, cid ka dulmi badanna ma jiro ruux ku been abuurtay Alle ama beeniyey aayaadkiisa, wuxuuna la kulmi camalkiisii iyo wixii loo yaboohay, markay dhimanna malaa'igtaa canaanata oo warsata waxay caabudi jireen oo Alle ka soo hadhay, waxayna qirtaan gaalnimadii iyagoo waxay caabudayeen ka maqnaaday, taasna waxay dadka uga digi inay wax Alle ka soo hadhay wax ka dayaan. **[Al-Acraaf: 34-37].**

قَالَ ٱدْخُلُوا۟ فِىٓ أُمَمٍ قَدْ خَلَتْ مِن
قَبْلِكُم مِّنَ ٱلْجِنِّ وَٱلْإِنسِ فِى ٱلنَّارِ ۖ
كُلَّمَا دَخَلَتْ أُمَّةٌ لَّعَنَتْ أُخْتَهَا ۖ حَتَّىٰٓ
إِذَا ٱدَّارَكُوا۟ فِيهَا جَمِيعًا قَالَتْ أُخْرَىٰهُمْ
لِأُولَىٰهُمْ رَبَّنَا هَـٰٓؤُلَآءِ أَضَلُّونَا فَـَٔاتِهِمْ
عَذَابًا ضِعْفًا مِّنَ ٱلنَّارِ ۖ قَالَ لِكُلٍّ
ضِعْفٌ وَلَـٰكِن لَّا تَعْلَمُونَ ﴿٣٨﴾

38. Wuxuu yidhi Alle la gala naarta ummado hortiin tegay oo jinni iyo insiba leh, markastooy ummadu gasho waxay lacnaddaa walaasheed (saaxiibkeed) markay isku haleelaan dhammaantood dhexdeedana waxay ku dhahdaa tan dambe (wax raacda) tan hore (la raaco) Allow kuwanaa na dhumiyey ee u laablaab cadaab, Alle wuxuu odhan mid kasta waa loo laablaabi mase ogidin.

39. Waxay ku odhan tan hore tan dambe wax dheeraada naguma lihidin ee dhadhamiya cadaabka waxaad kasbanayseen darteed.

وَقَالَتْ أُولَىٰهُمْ لِأُخْرَىٰهُمْ فَمَا كَانَ لَكُمْ عَلَيْنَا مِن فَضْلٍ فَذُوقُوا۟ ٱلْعَذَابَ بِمَا كُنتُمْ تَكْسِبُونَ ﴿٣٩﴾

40. Kuwa beeniyey aayadkanaga oo iska kibriyey looma furo iridaha samada mana galaan jannada intuu ka galo rati irbad dulkeed, saasaana ku abaal marinaa dambiilayaasha.

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَذَّبُوا۟ بِـَٔايَـٰتِنَا وَٱسْتَكْبَرُوا۟ عَنْهَا لَا تُفَتَّحُ لَهُمْ أَبْوَٰبُ ٱلسَّمَآءِ وَلَا يَدْخُلُونَ ٱلْجَنَّةَ حَتَّىٰ يَلِجَ ٱلْجَمَلُ فِى سَمِّ ٱلْخِيَاطِ ۚ وَكَذَٰلِكَ نَجْزِى ٱلْمُجْرِمِينَ ﴿٤٠﴾

41. Waxay ku mudan jahannamo gogol, korkoodana waxaa ahaan dabool, saasaana ku abaal marinnaa daalimiinta.

لَهُم مِّن جَهَنَّمَ مِهَادٌ وَمِن فَوْقِهِمْ غَوَاشٍ ۚ وَكَذَٰلِكَ نَجْزِى ٱلظَّـٰلِمِينَ ﴿٤١﴾

Alle wuxuu ku odhan gaalada maalinta qiyaame la gala naarta ummado idinka horreeyey oo jinni iyo insiba leh, markay naarta galaanna inay isnacladaan, iyagoo sheegi inay dhumiyeen kuwaasu oyna warsan Alle inuu u laab laabo cadaabka, dhammaantoodse waa loo laab laabi cadaabka, kan wax dhumiyey iyo kan la dhumiyeyba, mase oga, calaacal iyo qaylana wax uma tarto, kuwa beeniyey aayaadka Alle oo iska kibriyeyna cirka looma furo jannana ma galaan inta rati ka galo irbad dulkeed, waana abaalka dambiilayaasha, jahannamaana hoos iyo korba ka jiri taasoo ah abaalka daalimiinta. Waxaana ku soo arooray nafta fiican iyo tan xun xadiith dheer oo sheegi in tan fiican loo furi samada lana soo dhaweyn, tan xunna laga xidhi samada iyadoo suudh xun leh. Alle ayaanna ka magan gallay xumaan. **[Al-Acraaf: 38-41].**

42. Kuwa rumeeyey xaqa oo falay camal fiican, kuma mashaqaynno naf waxayna karin, kuwaasu waa jannada ehelkeeda, wayna ku dhex waari.

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّـٰلِحَـٰتِ لَا نُكَلِّفُ نَفْسًا إِلَّا وُسْعَهَآ أُو۟لَـٰٓئِكَ أَصْحَـٰبُ ٱلْجَنَّةِ ۖ هُمْ فِيهَا خَـٰلِدُونَ ﴿٤٢﴾

43. Waxaanna ka siibnaa waxa ku jira laabtooda oo xasada, waxaana dareeri hoostooda wabiyadii, waxayna dhahaan mahad waxaa mudan

وَنَزَعْنَا مَا فِى صُدُورِهِم مِّنْ غِلٍّ تَجْرِى مِن تَحْتِهِمُ ٱلْأَنْهَـٰرُ ۖ وَقَالُوا۟ ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ ٱلَّذِى هَدَىٰنَا لِهَـٰذَا وَمَا كُنَّا لِنَهْتَدِىَ

لَوْلَآ أَنْ هَدَىٰنَا ٱللَّهُ ۖ لَقَدْ جَآءَتْ رُسُلُ رَبِّنَا بِٱلْحَقِّ ۖ وَنُودُوٓا۟ أَن تِلْكُمُ ٱلْجَنَّةُ أُورِثْتُمُوهَا بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٤٣﴾

Allaha nagu hanuuniyey kan (wanaagga) maannaan hanuunneen haddaan Alle na hanuunin, waxay la timid rasuulladii Rabbigeen xaq, waxaana loogu dhawaaqay tiinnani waa jannadii laydin dhaxalsiiyey camalkiinna dartiis.

Markuu Alle sheegay kuwii xumaa wuxuu raaciyey kuwii liibaanay, waana kuwa xaqa rumeeyey ee camal fiican falay, kuwaasoo ku waari jannada, oo wanaag ku dhan yahay, isagoo laga daahiriyey xumaan iyo xasadba, kuna mahadin Allahooda hanuuniyey, illeen cidaan Alle hanuunin ma toosee, waxayna qiri in rasuulladii Alle xaq la yimaadeen, waxaana loogu dhawaaqi inay galaan jannada iyagoo ku dhaxli camalkoodii fiicnaa dartiis.

Waxaa xadiith ku sugnaaday in markay mu'miniintu ka nabadgalaan naarta lagu joojin meel u dhaxaysa jannada iyo naarta, markaasaa laysu qisaasi waxay isku dulmiyeen adduunkii, markii la daahiriyo yaa loo idmi inay galaan jannada. Wuxuuna Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ku dhaartay in mid kasta ka garan og yahay gurigiisa jannada in ka badan kii adduunka. Waxaa wariyey (Bukhaari). **[Al-Acraaf: 42-43].**

وَنَادَىٰٓ أَصْحَٰبُ ٱلْجَنَّةِ أَصْحَٰبَ ٱلنَّارِ أَن قَدْ وَجَدْنَا مَا وَعَدَنَا رَبُّنَا حَقًّا فَهَلْ وَجَدتُّم مَّا وَعَدَ رَبُّكُمْ حَقًّا ۖ قَالُوا۟ نَعَمْ ۚ فَأَذَّنَ مُؤَذِّنٌۢ بَيْنَهُمْ أَن لَّعْنَةُ ٱللَّهِ عَلَى ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٤٤﴾

44. Waxay u dhawaaqaan ehelu jannuhu ehelu naarka waan hellay wixii Alle noo yaboohay si dhab ah ee idinku ma hesheen wuxuu idiin yaboohay Alle si dhab ah, waxayna dhahaan haa waxaana ka dhawaaqa dhexdooda mid dhawaaqa lacnadda Alle ha ku dhacdo daalimiinta.

ٱلَّذِينَ يَصُدُّونَ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ وَيَبْغُونَهَا عِوَجًا وَهُم بِٱلْءَاخِرَةِ كَٰفِرُونَ ﴿٤٥﴾

45. Ah kuwa ka celiya dadka jidka Alle lana doona qallooca, iyagoo aakhiro ka gaaloobay.

46. Dhexdoodana waxaa ahaan xijaab, acraafkana (meel sare) waxaa ahaan dad ku garan cid kasta calaamaddooda, waxayna u dhawaaqaan ehelu jannaha iyagoo ku leh nabadgalyo korkiinna ha ahaato, mayna galin jannada wayse damci.

وَبَيْنَهُمَا حِجَابٌ ۚ وَعَلَى ٱلْأَعْرَافِ رِجَالٌ يَعْرِفُونَ كُلًّۢا بِسِيمَىٰهُمْ ۚ وَنَادَوْا۟ أَصْحَٰبَ ٱلْجَنَّةِ أَن سَلَٰمٌ عَلَيْكُمْ ۚ لَمْ يَدْخُلُوهَا وَهُمْ يَطْمَعُونَ ﴿٤٦﴾

47. Markii loo jeediyo wajigooda xagga ehelu naarka waxay dhahaaan Allow ha na yeelin la jirka daalimiinta.

* وَإِذَا صُرِفَتْ أَبْصَٰرُهُمْ تِلْقَآءَ أَصْحَٰبِ ٱلنَّارِ قَالُوا۟ رَبَّنَا لَا تَجْعَلْنَا مَعَ ٱلْقَوْمِ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٤٧﴾

Ehelu jannuhu wuxuu la hadli ehelu naarka iyagoo warsanaya inay heleen wixii Alle ugu goodiyey ee ciqaab ahaa, iyaguna way heleen wixii wanaag ahaa ee Alle u yaboohay, waxayna ugu jawaabeen inay heleen, markaasaa dhexdooda lagu dhawaaqay lacnadu ha ku dhacdo daalimiinta dadka ka leexiya jidka Alle oo qallooca la rabta, aakharana ka gaaloobay, waxaana u dhaxeeya xijaab, acraafkana waxaa ah dad ku garan cid kasta calaamaddeeda, waxayna ugu dhawaaqaan ehelu jannaha nabadgalyo korkiinna ha ahaato waana dad aan wali galin jannada doonahayase, haddii loo jeediyo xagga ehelu naarkana waxay dhahaan Rabbigeenow ha na yeelin la jirka daalimiinta. Aayaduhuna waxay caddayn sida loo kala bixi maalinta aakharo, cid walbana ay u heli wuxuu Alle ugu yaboohay una camal falay, wax isku qasanna uusan u jirin, Alle na waa kariim caadila awoodna badan. **[Al-Acraaf: 44-47].**

48. Waxay u dhawaaqayaan dadka acraafku dad ay ku garan calaamaddooda, waxayna ku odhan waxba idiinma tarin badnaantiinnii (kulankiinnii) iyo waxaad isku kibrinayseen.

وَنَادَىٰٓ أَصْحَٰبُ ٱلْأَعْرَافِ رِجَالًا يَعْرِفُونَهُم بِسِيمَىٰهُمْ قَالُوا۟ مَآ أَغْنَىٰ عَنكُمْ جَمْعُكُمْ وَمَا كُنتُمْ تَسْتَكْبِرُونَ ﴿٤٨﴾

49. Ma kuwanaa kuwaad ku dhaarateen inaan Alle gaadhsiinayn (siinayn) naxariis (waxaana lagu odhan) gala jannada idinkoon cabsi iyo walbahaar midna arkayn.

أَهَٰٓؤُلَآءِ ٱلَّذِينَ أَقْسَمْتُمْ لَا يَنَالُهُمُ ٱللَّهُ بِرَحْمَةٍ ۚ ٱدْخُلُوا۟ ٱلْجَنَّةَ لَا خَوْفٌ عَلَيْكُمْ وَلَآ أَنتُمْ تَحْزَنُونَ ﴿٤٩﴾

50. Waxay u dhawaaqi ehelu naarku ehelu jannaha (iyagoo dhihi): noogu soo deeqa biyaha ama waxa Alle idinku arzaaqay, waxayna dhahaan Alle wuu ka xarrimay labadaas gaalada.

وَنَادَىٰٓ أَصۡحَٰبُ ٱلنَّارِ أَصۡحَٰبَ ٱلۡجَنَّةِ أَنۡ أَفِيضُواْ عَلَيۡنَا مِنَ ٱلۡمَآءِ أَوۡ مِمَّا رَزَقَكُمُ ٱللَّهُۚ قَالُوٓاْ إِنَّ ٱللَّهَ حَرَّمَهُمَا عَلَى ٱلۡكَٰفِرِينَ ٥٠

51. Ee ah kuwa ka yeeshay diintooda madadaalo iyo ciyaar, oyna dhagartay nolosha adduunyo, maanta wuu ku dayn naarta siday u halmaameen la kulanka maalintan, iyo diiddadooda aayaadkannaga dartiis.

ٱلَّذِينَ ٱتَّخَذُواْ دِينَهُمۡ لَهۡوٗا وَلَعِبٗا وَغَرَّتۡهُمُ ٱلۡحَيَوٰةُ ٱلدُّنۡيَاۚ فَٱلۡيَوۡمَ نَنسَىٰهُمۡ كَمَا نَسُواْ لِقَآءَ يَوۡمِهِمۡ هَٰذَا وَمَا كَانُواْ بِـَٔايَٰتِنَا يَجۡحَدُونَ ٥١

Waxayna u dhawaaqaan dadka acraafku dad ay ku garan calaamaddooda oy kuna dhihi waxba idiinma tarin waxaad kulminayseen iyo waxaad kasbanayseen waana kuwaas kuwaad ku dhaaranayseen inuusan Alle siinayn naxariis, waxaana lagu odhan gala jannada idinkoon cabsi iyo murugo midna arkayn, waana dadkii rumeeyey xaqa, waxaase dhawaaqay ehelu naarkii (Alle ayaan ka magan gallaye) iyagoo ku dhihi ehelu jannaha biyaha wax naga siiya oo noogu deeqa, iyo waxa Alle idinku arzaaqay waxayna dhahaan Alle ayaa ka xarrimay gaalada ka yeeshay diintooda madadaalo iyo ciyaar, oyna dhagartay nolosha adduunyo, maalinta qiyaamana waxaa lagu dhex dayn naarta siday u halmaameen la kulanka maalintaas, aayaadkana u diideen. **[Al-Acraaf: 48-51].**

52. Dhab ahaan baannu ugula nimid kitaab aannu caddaynay annagoo ku cilmi leh, isagoo hanuun iyo naxariis u ah ciddii rumayn.

وَلَقَدۡ جِئۡنَٰهُم بِكِتَٰبٖ فَصَّلۡنَٰهُ عَلَىٰ عِلۡمٍ هُدٗى وَرَحۡمَةٗ لِّقَوۡمٖ يُؤۡمِنُونَ ٥٢

53. Miyey sugi waxaan ahayn wuxuu sheegi quraanku, maalintuu yimaaddo wuxuu sheegi quraanku waxay odhan kuwii horay u halmaamay (kuna camal falin): waxay la timid rasuulladii Alle xaq, ee ma jiraa shufaco

هَلۡ يَنظُرُونَ إِلَّا تَأۡوِيلَهُۥۚ يَوۡمَ يَأۡتِي تَأۡوِيلُهُۥ يَقُولُ ٱلَّذِينَ نَسُوهُ مِن قَبۡلُ قَدۡ جَآءَتۡ رُسُلُ رَبِّنَا بِٱلۡحَقِّ فَهَل لَّنَا مِن شُفَعَآءَ فَيَشۡفَعُواْ لَنَآ أَوۡ نُرَدُّ فَنَعۡمَلَ غَيۡرَ ٱلَّذِي كُنَّا نَعۡمَلُۚ

قَدْ خَسِرُوٓاْ أَنفُسَهُمْ وَضَلَّ عَنْهُم مَّا كَانُواْ يَفْتَرُونَ ﴿٥٣﴾

ha noo shafeeceene, ama ma nala celin inaan fallo waxaan ahayn waxaan fali jirray, waxay khasaariyeen naftooda waxaana ka dhumay waxay been abuuran jireen.

إِنَّ رَبَّكُمُ ٱللَّهُ ٱلَّذِى خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ فِى سِتَّةِ أَيَّامٍ ثُمَّ ٱسْتَوَىٰ عَلَى ٱلْعَرْشِ ۖ يُغْشِى ٱلَّيْلَ ٱلنَّهَارَ يَطْلُبُهُۥ حَثِيثًا وَٱلشَّمْسَ وَٱلْقَمَرَ وَٱلنُّجُومَ مُسَخَّرَٰتٍۭ بِأَمْرِهِۦٓ ۗ أَلَا لَهُ ٱلْخَلْقُ وَٱلْأَمْرُ ۗ تَبَارَكَ ٱللَّهُ رَبُّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٥٤﴾

54. Rabbigiin waa Allihii ku abuuray samooyinka iyo dhulka lix maalmood kana kornoqday carshiga, wuxuuna ku daboolaa habeenka maalinta, wuuna doonaa habeenku si degdega, qorraxda dayaxa iyo xidigahana (Alle waa abuuray) iyagoo loo sakhiray amarka Alle, Alle ayaana abuuridda iyo amarkaba iska leh, waxaana waynaaday «oo khayr batay» Rabbiga barbaariya caalamka.

Alle wuxuu soo dejiyey kitaabka quraanka ah oo cad, wanaagna ku dhan yahay, gaalase waxay xaqiiqada dhabta ah ogaan markuu u yimaaddo wuxuu sheegi oo xaq ah, waxaana khasaari ciddii iska nacday oon ku camal falin oo iska halmaantay, waxayna ku calaacali inay rasuulladii Alle xaq ula yimaadeen, yaase u shafeeci ama u celin adduunkii si ay camal fiican u falaan. Aayadda kale waxay ka warrami awoodda Alle iyo siduu u abuuray cirka, dhulka, qorraxda, dayaxa, iyo xidigahaba, uguna sugnaaday abuuridda iyo amarkuba, waana Allaha wayn ee khayrka badan caalamkana Alle u ah. Aayaddana kama muuqdo wax Alle khalqigiisa ku dhaweeya, jidka xaqa ah ee toosanna waa in la raaco jidkii hore ee suubbanaa. Wuxuu yidhi Nucaym binu Xammaad sheekhii Bukhaari: ciddii Alle u ekaysiisa dadka wuu gaaloobay, ciddii diidda wax Alle isku tilmaamayna wuu gaaloobay, wuxuu Alle isku sheegay ama Rasuulkiisu ku tilmaamay u ekaysiin ma leh, waana in Alle xumaan laga dheereeyo wanaagna lagu tilmaamo. **[Al-Acraaf: 52-54].**

ٱدْعُواْ رَبَّكُمْ تَضَرُّعًا وَخُفْيَةً ۚ إِنَّهُۥ لَا يُحِبُّ ٱلْمُعْتَدِينَ ﴿٥٥﴾

55. U barya Allihiin si khashuuc ah iyo qarsoodi illeen Alle ma jecla kuwa xad gudbee.

56. Hana fasaadinnina dhulka inta la wanaajiyey ka dib, baryana Alle cabsi iyo doonidba, naxariista Alle na waxay u dhawdahay kuwa samaha fala.

وَلَا تُفْسِدُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ بَعْدَ إِصْلَٰحِهَا وَٱدْعُوهُ خَوْفًا وَطَمَعًا ۚ إِنَّ رَحْمَتَ ٱللَّهِ قَرِيبٌ مِّنَ ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿٥٦﴾

57. Alle waa kan u dira dabaysha bishaaro naxariistiisa (roobka) hortiisa, markay xambaarto daruur culusna waxaan u kaxaynaa dhul dhintay (abaar ah) waxaana ku dejinnaa (shubnaa) biyaha, waxaana ku soo bixinnaa midho kasta, saasaana u soo bixinnaa wixii dhintay, inaad xusuusataan.

وَهُوَ ٱلَّذِى يُرْسِلُ ٱلرِّيَٰحَ بُشْرًۢا بَيْنَ يَدَىْ رَحْمَتِهِۦٓ ۖ حَتَّىٰٓ إِذَآ أَقَلَّتْ سَحَابًا ثِقَالًا سُقْنَٰهُ لِبَلَدٍ مَّيِّتٍ فَأَنزَلْنَا بِهِ ٱلْمَآءَ فَأَخْرَجْنَا بِهِۦ مِن كُلِّ ٱلثَّمَرَٰتِ ۚ كَذَٰلِكَ نُخْرِجُ ٱلْمَوْتَىٰ لَعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ ﴿٥٧﴾

58. Dhulka fiican wuxuu ku soo baxaa dooggiisu idinka Alle, midka xunna waxaan dhib ahayn kuma soo baxo, saasaan ugu caddaynnaa aayaadka ciddii ku shukrin Alle.

وَٱلْبَلَدُ ٱلطَّيِّبُ يَخْرُجُ نَبَاتُهُۥ بِإِذْنِ رَبِّهِۦ ۖ وَٱلَّذِى خَبُثَ لَا يَخْرُجُ إِلَّا نَكِدًا ۚ كَذَٰلِكَ نُصَرِّفُ ٱلْءَايَٰتِ لِقَوْمٍ يَشْكُرُونَ ﴿٥٨﴾

Alle waa in loo baryaa si habboon, dhulka waa in wanaag lagu joogaa oon la fasaadin inta Alle wanaajiyey ka dib, Alle waa in lagu xidhnaado illeen naxariistiisu waxay u dhawdahay sama falayaashee, wuxuu Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ku yidhi asaxaabta: dadyahow u dhimriya naftiinna idinku uma dhawaaqaysaan Alle dhaga la' ama maqane, Rabbigaad baryeysaan waa maqle dhaw. Aayadaha kale waxay ka warrami sida Alle ugu nicmeeyey addoomadiisa roobna ugu keeno, uguna nooleeyo dhul dhintay, uguna soo bixiyo doog iyo barwaaqo si ay calaamo ugu noqoto awoodda Alle iyo inuu soo nooleyn karo wixii dhintay, dadkuna waxay la mid yihiin dhulka oo midna khayrbaa ka imaan oo xaquu raaci sida dhul roob wax ka soo saaray, midna waa xaqdiide sida dhul xun oon wax soo dhalinayn, taasina dadkaa loo caddayn inay wax gartaan. **[Al-Acraaf: 55-58].**

59. Waxaan u dirray Nabi Nuux qoomkiisii, wuxuuna ku yidhi qoomkayow caabuda Alle,

لَقَدْ أَرْسَلْنَا نُوحًا إِلَىٰ قَوْمِهِۦ فَقَالَ يَٰقَوْمِ ٱعْبُدُوا۟ ٱللَّهَ مَا لَكُم مِّنْ إِلَٰهٍ غَيْرُهُۥٓ

idiinma sugna macbuud cibaado mudan oo ka soo hadhaye, anugu waxaan idiinka cabsan cadaab maalin wayn.

إِنِّيٓ أَخَافُ عَلَيۡكُمۡ عَذَابَ يَوۡمٍ عَظِيمٖ ٥٩

60. Waxay dheheen madaxdii qoomkiisa ka mid ahayd waxaan kugu aragnaa baadi cad.

قَالَ ٱلۡمَلَأُ مِن قَوۡمِهِۦٓ إِنَّا لَنَرَىٰكَ فِي ضَلَٰلٖ مُّبِينٖ ٦٠

61. Wuxuuna yidhi qoomkayow baadi kuma sugni waxaanse ahay Rasuulki Rabbiga caalamka.

قَالَ يَٰقَوۡمِ لَيۡسَ بِي ضَلَٰلَةٞ وَلَٰكِنِّي رَسُولٞ مِّن رَّبِّ ٱلۡعَٰلَمِينَ ٦١

62. Waxaanna idin soo gaadhsiin farriinta Rabbigay, waana idiin naseexayn, waxaanna ka ogahay xagga Alle waxaydaan ogayn.

أُبَلِّغُكُمۡ رِسَٰلَٰتِ رَبِّي وَأَنصَحُ لَكُمۡ وَأَعۡلَمُ مِنَ ٱللَّهِ مَا لَا تَعۡلَمُونَ ٦٢

63. Ma waxaad la yaabteen inuu idiinla yimid nin idinka mida xuska Allihiin, si uu idiinku digo iyo inaad dhawrsataan laydiinna naxariisto.

أَوَعَجِبۡتُمۡ أَن جَآءَكُمۡ ذِكۡرٞ مِّن رَّبِّكُمۡ عَلَىٰ رَجُلٖ مِّنكُمۡ لِيُنذِرَكُمۡ وَلِتَتَّقُواْ وَلَعَلَّكُمۡ تُرۡحَمُونَ ٦٣

64. Wayse beeniyeen waxaanna ku korinnay Nuux iyo intii la jirtay doontii, waxaanna maanshaynay kuwii beeniyey aayaadkannaga, illeen waxay ahaayeen qoom indha la' (xaqa arkayn).

فَكَذَّبُوهُ فَأَنجَيۡنَٰهُ وَٱلَّذِينَ مَعَهُۥ فِي ٱلۡفُلۡكِ وَأَغۡرَقۡنَا ٱلَّذِينَ كَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِنَآۖ إِنَّهُمۡ كَانُواْ قَوۡمًا عَمِينَ ٦٤

Quraanku wax badan yuu ka warramay Nabi Nuux iyo Nabiyada kalaba, siday xaqa u gaadhsiiyeen dadkii iyo siday u beeniyeen, iyagoo Nabiyadu nasteex u ah qoomkoodii, iyaguna ka madax adaygi, waxase loo baahan yahay in lagu waano qaato, xaqana la raaco, waxayse noqotay cidhibtii qoomkii Nabi Nuux in la halaago oo biyo iyo duufaan lagu maansheeyo, Nabi Nuux iyo intii raacdayna ay nabad galaan oo u hadhaan dhulkii iyagoo doon koray. Maxamed binu Isxaaq wuxuu yidhi: Nabi Nuux wuxuu la kulmay cid la kulantay ma jirto Nabi la dilay mooyee. Ibnu Cabbaasna wuxuu yidhi: qoomkii Nabi Nuux waa qoomkii ugu horreeyey ee caabuda sanam. Ujeeddadu waa in xaqa la raaco, xumaantana laga leexdo si loo liibaano. **[Al-Acraaf: 59-64].**

65. Waxaan u dirray caadna walaalkood (Nabi) Huud wuxuuna yidhi: qoomkayow caabuda Alle, idiinma sugna macbuud xaq ah oo ka soo hadhay isaga, miyeydaan dhawrsanayn.

* وَإِلَىٰ عَادٍ أَخَاهُمْ هُودًا ۚ قَالَ يَٰقَوْمِ ٱعْبُدُوا۟ ٱللَّهَ مَا لَكُم مِّنْ إِلَٰهٍ غَيْرُهُۥٓ ۚ أَفَلَا تَتَّقُونَ ﴿٦٥﴾

66. Waxay dheheen madaxdii gaalowday oo qoomkiisa ka mid ah, annagu waxaan kugu aragnaa safaaho (caqli xumo) waxaanna kuu malaynaynaa inaad ka mid tahay beenaalayaasha.

قَالَ ٱلْمَلَأُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مِن قَوْمِهِۦٓ إِنَّا لَنَرَىٰكَ فِى سَفَاهَةٍ وَإِنَّا لَنَظُنُّكَ مِنَ ٱلْكَٰذِبِينَ ﴿٦٦﴾

67. Wuxuuna yidhi qoomkayow safaaho (caqli xumo) ima hayso waxaanse ahay rasuul Rabbiga caalamka.

قَالَ يَٰقَوْمِ لَيْسَ بِى سَفَاهَةٌ وَلَٰكِنِّى رَسُولٌ مِّن رَّبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٦٧﴾

68. Waxaanna idin soo gaadhsiin farriinta Allahay, waxaana idiin ahay nasteex aamina.

أُبَلِّغُكُمْ رِسَٰلَٰتِ رَبِّى وَأَنَا۠ لَكُمْ نَاصِحٌ أَمِينٌ ﴿٦٨﴾

69. Ma waxaad la yaabteen inuu idiinla yimid xuska Allihiin nin idinka mid ah, inuu idiin digo, xusuusta markuu idinka yeelay Alle kuwa u hadhay (dhulka) qoomkii Nabi Nuux ka dib, idiinna kordhiyey xoog, ee xusuusta nicmada Alle, waxaad u dhawdihiin inaad liibaantaane.

أَوَعَجِبْتُمْ أَن جَآءَكُمْ ذِكْرٌ مِّن رَّبِّكُمْ عَلَىٰ رَجُلٍ مِّنكُمْ لِيُنذِرَكُمْ ۚ وَٱذْكُرُوٓا۟ إِذْ جَعَلَكُمْ خُلَفَآءَ مِنۢ بَعْدِ قَوْمِ نُوحٍ وَزَادَكُمْ فِى ٱلْخَلْقِ بَصْۜطَةً ۖ فَٱذْكُرُوٓا۟ ءَالَآءَ ٱللَّهِ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿٦٩﴾

Sidoo kale wuxuu Alle u diray caad Nabi Huud, waana caadkii hore, wuxuuna ku waaniyey inay Alle kaliya uun caabudaan, dhawrsadaanna illeen macbuud xaqa oo kale ma lehe, madaxdiise way gaaloobeen oo diideen xaqii oo xumaan iyo caqli yari ku sheegeen Nabigii, wuxuuse u sheegay inuusan caqli xumayn,

ee uu yahay Rasuul Rabbiga caalamka, gaadhsiinna farriinta Alle, yahayna nasteex aamina, oyna habboonayn inay la yaabaan in waxyi lagu soo dejiyo nin ka mid ah, inuu u digo, wuxuuna xusuusiyey in Alle ka yeelay kuwo ka soo hadhay kana dambeeya qoomkii Nabi Nuux, xoogna Alle u yeelay, oyna waajibna ku tahay inay xusuustaan nicmooyinka Alle, inay liibaanaan. Taasina waxay ku tusin inay xaqa iyo xumaantu dagaallamaan had iyo jeer, wanaagguna hadho xumaantuna tirtiranto. Taasoo muujin in xaqa lagu sugnaado, xumaantana laga leexdo. **[Al-Acraaf: 65-69].**

قَالُوٓاْ أَجِئۡتَنَا لِنَعۡبُدَ ٱللَّهَ وَحۡدَهُۥ وَنَذَرَ مَا كَانَ يَعۡبُدُ ءَابَآؤُنَاۖ فَأۡتِنَا بِمَا تَعِدُنَآ إِن كُنتَ مِنَ ٱلصَّٰدِقِينَ ٧٠

70. Waxay dheheen ma waxaad noola timid inaan caabudno Alle kaliya, oon ka tagno waxay caabudayeen aabayaalkanno, noo keen waxaad noogu goodiyeysay haddaad runle tahay.

قَالَ قَدۡ وَقَعَ عَلَيۡكُم مِّن رَّبِّكُمۡ رِجۡسٞ وَغَضَبٌۖ أَتُجَٰدِلُونَنِي فِيٓ أَسۡمَآءٖ سَمَّيۡتُمُوهَآ أَنتُمۡ وَءَابَآؤُكُم مَّا نَزَّلَ ٱللَّهُ بِهَا مِن سُلۡطَٰنٖۚ فَٱنتَظِرُوٓاْ إِنِّي مَعَكُم مِّنَ ٱلۡمُنتَظِرِينَ ٧١

71. Wuxuu yidhi waxaa idinkaga dhacaya xagga Alle cadaab iyo cadho, ma waxaad igula murmaysaan magacyo ood magacoowdeen idinka iyo aabayaalkiin oon Alle u soo dejinin xujo, suga anna waan idinla sugiye.

فَأَنجَيۡنَٰهُ وَٱلَّذِينَ مَعَهُۥ بِرَحۡمَةٖ مِّنَّا وَقَطَعۡنَا دَابِرَ ٱلَّذِينَ كَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِنَاۖ وَمَا كَانُواْ مُؤۡمِنِينَ ٧٢

72. Markaasaan korinnay isaga iyo intii la jirtay, naxariistannada darteed, waxaanna goynay cidhibta kuwa beeniyey aayaadkannaga, mana ayan rumayn (xaqa).

Nabi Huud iyo Nabiyada kalaba waxay la yimaaddeen in Alle kaliya la caabudo, hase yeeshee way la yaabeen gaaladii Caad, waxayna diideen inay ka tagaan waxay aabayaalkood caabudi jireen, waxaase ku dhacay ciqaab iyo cadho Alle, illeen cilmi la'aan yey ku murmeen Alle iyo xaqiiye, waxaana la cidhib tiray intii beenisay xaqa ee gaalada ahayd, sidii lagu halaagayna waxaa caddeeyey aayado kale oo badan, oo tilmaami sidii loo halaagay markay kibreen oo xaqii beeniyeen, taasuna waa u digid ciddii marta waddadoodii, oo xaqa ka madax adaygta, cid xoog iyo tabar ku faani kartana ma jirto illeen dad waa miskiin tabar yare, **[Al-Acraaf: 70-72].**

وَإِلَىٰ ثَمُودَ أَخَاهُمْ صَٰلِحًا ۚ قَالَ يَٰقَوْمِ ٱعْبُدُوا۟ ٱللَّهَ مَا لَكُم مِّنْ إِلَٰهٍ غَيْرُهُۥ ۖ قَدْ جَآءَتْكُم بَيِّنَةٌ مِّن رَّبِّكُمْ ۖ هَٰذِهِۦ نَاقَةُ ٱللَّهِ لَكُمْ ءَايَةً ۖ فَذَرُوهَا تَأْكُلْ فِىٓ أَرْضِ ٱللَّهِ ۖ وَلَا تَمَسُّوهَا بِسُوٓءٍ فَيَأْخُذَكُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٧٣﴾

73. Waxaan u dirray Thamuudna walaalkood Nabi Saalax, wuxuuna yidhi qoomkayow caabuda Alle wax ka soo hadhay Alle oo cibaado mudan idiinma sugnee, waxaa idiinka timid xagga Alle xujo (cad) tanna waa hashii Alle, waxayna idiin tahay calaamo, ee iska daaya ha ka cunto dhulka Alle, hana ku taabannina xumaan oo markaas idin qabto cadaab daran.

وَٱذْكُرُوٓا۟ إِذْ جَعَلَكُمْ خُلَفَآءَ مِنۢ بَعْدِ عَادٍ وَبَوَّأَكُمْ فِى ٱلْأَرْضِ تَتَّخِذُونَ مِن سُهُولِهَا قُصُورًا وَتَنْحِتُونَ ٱلْجِبَالَ بُيُوتًا ۖ فَٱذْكُرُوٓا۟ ءَالَآءَ ٱللَّهِ وَلَا تَعْثَوْا۟ فِى ٱلْأَرْضِ مُفْسِدِينَ ﴿٧٤﴾

74. Xusuusta markuu idinka yeelay (Alle) kuwo baddalay Caad, kadib idin dajiyeyna dhulka, idinkoo ka yeelay dooxyaheeda daaro, ood kana qoranaysaan buuraheeda guryo, xusuusta nicmooyinka hana fasaadinnina dhulka.

قَالَ ٱلْمَلَأُ ٱلَّذِينَ ٱسْتَكْبَرُوا۟ مِن قَوْمِهِۦ لِلَّذِينَ ٱسْتُضْعِفُوا۟ لِمَنْ ءَامَنَ مِنْهُمْ أَتَعْلَمُونَ أَنَّ صَٰلِحًا مُّرْسَلٌ مِّن رَّبِّهِۦ ۚ قَالُوٓا۟ إِنَّا بِمَآ أُرْسِلَ بِهِۦ مُؤْمِنُونَ ﴿٧٥﴾

75. Waxayna ku dheheen madaxdii iskibrisay oo qoomkiisa ka mida kuwii tabarta yaraa oo rumeeyey: ma waxaad og tihiin in Saalax laga soo diray xagga Alle, waxayna dheheen annagu waxa lagu diray waan rumaynay.

قَالَ ٱلَّذِينَ ٱسْتَكْبَرُوٓا۟ إِنَّا بِٱلَّذِىٓ ءَامَنتُم بِهِۦ كَٰفِرُونَ ﴿٧٦﴾

76. Waxayna dheheen kuwii iskibriyey annagu waxaad rumeeyseen waan ka gaaloownay.

Reer Thamuud waxay ahaayeen qoom caraba oo loo soo diray Nabi Saalax, wuxuuna faray inay Alle kaliya caabudaan una sheegay in hasha loo soo diray ay calaamo u tahay, oyna nabadgaliyaan, xusuustaanna nicmooyinkii Alle, dhulkana ayan fasaadin, waxaase iskibriyey sidii caadada ahayd kuwii madaxda ahaa, iyagoo warsan warsi xun in (Nabi) Saalax laga soo diray xagga Alle, waxayna caddeeyeen inay diideen waxa lagu soo diray Nabi Saalax, mu'miniitiise waxay caddeeyeen inay xaqa rumeeyeen, saas darteed waa inaan cidna ismoodin inay iyadu xaqa ka sarrayso ama awood leedahay, illeen xaqaa mudan in la raacee. **[Al-Acraaf: 73-76].**

فَعَقَرُواْ ٱلنَّاقَةَ وَعَتَوۡاْ عَنۡ أَمۡرِ رَبِّهِمۡ وَقَالُواْ يَٰصَٰلِحُ ٱئۡتِنَا بِمَا تَعِدُنَآ إِن كُنتَ مِنَ ٱلۡمُرۡسَلِينَ ٧٧

77. Waxayna dileen hashii waxayna ka madax adaygeen amarkii Rabbigood, waxayna dheheen saalaxow noo keen waxaad noogu goodiyeyso haddaad tahay mid la soo diray.

فَأَخَذَتۡهُمُ ٱلرَّجۡفَةُ فَأَصۡبَحُواْ فِي دَارِهِمۡ جَٰثِمِينَ ٧٨

78. Waxaana qabtay gariirkii waxayna ahaadeen kuwo guryahoodii ku dhintay.

فَتَوَلَّىٰ عَنۡهُمۡ وَقَالَ يَٰقَوۡمِ لَقَدۡ أَبۡلَغۡتُكُمۡ رِسَالَةَ رَبِّي وَنَصَحۡتُ لَكُمۡ وَلَٰكِن لَّا تُحِبُّونَ ٱلنَّٰصِحِينَ ٧٩

79. Wuxuuna ka jeedsaday «Nabi saalax» xaggooda, wuxuuna yidhi: waan idin gaadhsiiyey farriintii Rabbigey waana idiin naseexeeyey mase jeclidiin nasteexa.

Waxay caddayn aayaduhu inay dileen hashii, inkastoo la sheegay in nin kaliya dilay haddana waxay aayaddu sheegtay inay dhammaan wax ka dileen illeen raalli bay ka ahaayeen dilkeedee, waxayna ku dambeeyeen in dhul gariir lagu halaagay, oy guryahoodi ku bakhtiyeen, Nabi Saalaxna wuxuu sheegay inuu ku dadaalay siday xaqa u rumayn lahaayeen uguna naseexeeyey mase jeclayn kuwa naseexeeya. Taasina waxay caddayn in ciddii xaqa iyo naseexada diidda ay la kulmi ciqaab iyo halaag, waxaa kale oo ay ku tusin inay waajib tahay in jidka toosan la raaco, xumaantana laga leexdo. **[Al-Acraaf: 77-79].**

وَلُوطًا إِذۡ قَالَ لِقَوۡمِهِۦٓ أَتَأۡتُونَ ٱلۡفَٰحِشَةَ مَا سَبَقَكُم بِهَا مِنۡ أَحَدٖ مِّنَ ٱلۡعَٰلَمِينَ ٨٠

80. Xusuuso Nabi Luud markuu ku yidhi qoomkiisii: ma waxaad la imaanaysaan xumaanta uusan idiinka hormarin ruux caalamka ka mid ah.

81. Idinku waxaad u tagaysaan ragga hunguriyeyn darteed, haweenka ka sokow, waxaadse tihiin qoom xad gudbay.

إِنَّكُمْ لَتَأْتُونَ ٱلرِّجَالَ شَهْوَةً مِّن دُونِ ٱلنِّسَآءِ ۚ بَلْ أَنتُمْ قَوْمٌ مُّسْرِفُونَ ﴿٨١﴾

82. Waxayna ahayd jawaabtii qoomkiisa, ka bixiya Luud iyo inta rumaysay magaaladiinna waaba dad isdaahirinayee.

وَمَا كَانَ جَوَابَ قَوْمِهِۦٓ إِلَّآ أَن قَالُوٓا۟ أَخْرِجُوهُم مِّن قَرْيَتِكُمْ ۖ إِنَّهُمْ أُنَاسٌ يَتَطَهَّرُونَ ﴿٨٢﴾

83. Waana korinnay Luud iyo ehelkiisa haweenaydiisii mooyee oo ka mid noqotay kuwa halaag ku hadhay.

فَأَنجَيْنَٰهُ وَأَهْلَهُۥٓ إِلَّا ٱمْرَأَتَهُۥ كَانَتْ مِنَ ٱلْغَٰبِرِينَ ﴿٨٣﴾

84. Waxaanna ku soo daadinnay roob (naareed), bal day siday noqotay cidhibtii dambiilayaasha.

وَأَمْطَرْنَا عَلَيْهِم مَّطَرًا ۖ فَٱنظُرْ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلْمُجْرِمِينَ ﴿٨٤﴾

Qoomkii Nabi Luudna waxay ahaayeen kuwo akhlaaq xun, oo haweenka ka leexda oo ragga aada, markuu ka waaniyeyna waxay isfareen in Luud iyo inta rumaysay laga bixiyo magaalada, iyagoo ku caayey inay yihiin kuwo nadiifa, Alle ayaase halaagay, nabadna galiyey Nabi Luud iyo intii rumaysay. Waxaadna halkaas ku aragtaan in marka akhlaaqdu xumaato ay dadka iskaga darmaan wanaagga iyo xumaantu. Goormayse nadaafaddu ceeb noqotay, waana wax la yaab leh in wanaag laysku caayo. Qataadana wuxuu yidhi: way caayeen ceeb la'aan. **[Al-Acraaf: 80-84].**

85. Madyanna waxaan u dirray walaalkood Nabi Shucayb wuxuuna yidhi qoomkayow caabuda Alle, idiinma sugna Alle ku ka soo hadhaye, waxaa idiinka timid xagga Alle xujee, dhammaystirana miisidda iyo miisaanka, hana ka nusqaaminina dadka waxooda, hana fasaadinnina dhulka

وَإِلَىٰ مَدْيَنَ أَخَاهُمْ شُعَيْبًا ۚ قَالَ يَٰقَوْمِ ٱعْبُدُوا۟ ٱللَّهَ مَا لَكُم مِّنْ إِلَٰهٍ غَيْرُهُۥ ۖ قَدْ جَآءَتْكُم بَيِّنَةٌ مِّن رَّبِّكُمْ ۖ فَأَوْفُوا۟ ٱلْكَيْلَ وَٱلْمِيزَانَ وَلَا تَبْخَسُوا۟ ٱلنَّاسَ أَشْيَآءَهُمْ وَلَا تُفْسِدُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ بَعْدَ إِصْلَٰحِهَا ۚ ذَٰلِكُمْ خَيْرٌ لَّكُمْ إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ﴿٨٥﴾

wanaajin kadib, saasaa idiin khayr roon haddaad mu'miniin tihiin.

وَلَا تَقْعُدُواْ بِكُلِّ صِرَٰطٍ تُوعِدُونَ وَتَصُدُّونَ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ مَنْ ءَامَنَ بِهِۦ وَتَبْغُونَهَا عِوَجًا ۚ وَٱذْكُرُوٓاْ إِذْ كُنتُمْ قَلِيلًا فَكَثَّرَكُمْ ۖ وَٱنظُرُواْ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلْمُفْسِدِينَ ﴿٨٦﴾

86. Hana fadhiisannina jid kasta idinkoo goodin oo ka celin dadka jidka Alle ciddii rumaysa idinkoo qallooc la dooni, xusuustana markaad yareydeen oo Alle idin badiyey, dayana siday noqotay cidhibtii fasaadiyayaasha.

وَإِن كَانَ طَآئِفَةٌ مِّنكُمْ ءَامَنُواْ بِٱلَّذِىٓ أُرْسِلْتُ بِهِۦ وَطَآئِفَةٌ لَّمْ يُؤْمِنُواْ فَٱصْبِرُواْ حَتَّىٰ يَحْكُمَ ٱللَّهُ بَيْنَنَا ۚ وَهُوَ خَيْرُ ٱلْحَٰكِمِينَ ﴿٨٧﴾

87. Haddayse koox idinka mida rumaysay waxa laygu soo diray kooxna ayna rumeynin samra (suga) inta Alle ka kala xugmin dhexdeenna, isagaa xaakimmo u khayr roon.

Waxaa lagu sheegay madyan inay ahayd meel u dhaw magaalada macaan ee urdun, wuxuuna ka waaniyey Nabi Shucayb inayna nusqaaminin miisidda iyo miisaanidda, dadkana khayaamin, dhulkana ayan fasaadin wanaajin kadib, jidkana ayan fadhiisan iyagoo xaqa dadka ka celin iyagoo qallooc la raba, iyagoo laga rabo inay xusuustaan sida Alle u badiyey iyagoo yaraa, haddayse kooxu rumaysay xaqa midna beenisay ha la sugo inta Alle ka kala xukumo, illeen isagaa xaakimmo u khayr roon. Waxayna aayaduhu ku tusin xumaan falka qoomkaas, maxayse ka heleen oon ahayn waxa aayaduhu sheegi doonaan oo ciqaab darana. **[Al-Acraaf: 85-87].**

۞ قَالَ ٱلْمَلَأُ ٱلَّذِينَ ٱسْتَكْبَرُواْ مِن قَوْمِهِۦ لَنُخْرِجَنَّكَ يَٰشُعَيْبُ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ مَعَكَ مِن قَرْيَتِنَآ أَوْ لَتَعُودُنَّ فِى مِلَّتِنَا ۚ قَالَ أَوَلَوْ كُنَّا كَٰرِهِينَ ﴿٨٨﴾

88. Waxay dheheen madaxdii iskibrisay oo qoomkiisii ah waxaannu kaa bixin Shucaybow adiga iyo kuwa ku rumeeyey magaaladannada ama waxaad ku soo noqon diintannada, wuxuuna yidhi: oo haddaan necebnahayna (ma nugu qasbeysaan).

89. Waxaan ku been abuurannay Alle haddaan ku noqonno diintiinna inta Alle naga koriyey ka dib, nagumana habboona inaan ku noqonno in Alle doono mooyee ee Rabbigeen ah, illeen Rabbigeen ayaa cilmigiisu waasac yahaye, waxaanna talo saarannay Alle, Allow nagu kala xukun dhexdannada xaq, adaa xaakin u khayr roon e.

قَدِ ٱفْتَرَيْنَا عَلَى ٱللَّهِ كَذِبًا إِنْ عُدْنَا فِى مِلَّتِكُم بَعْدَ إِذْ نَجَّىٰنَا ٱللَّهُ مِنْهَا ۚ وَمَا يَكُونُ لَنَآ أَن نَّعُودَ فِيهَآ إِلَّآ أَن يَشَآءَ ٱللَّهُ رَبُّنَا ۚ وَسِعَ رَبُّنَا كُلَّ شَىْءٍ عِلْمًا ۚ عَلَى ٱللَّهِ تَوَكَّلْنَا ۚ رَبَّنَا ٱفْتَحْ بَيْنَنَا وَبَيْنَ قَوْمِنَا بِٱلْحَقِّ وَأَنتَ خَيْرُ ٱلْفَٰتِحِينَ ﴿٨٩﴾

Aayadahan waxay ka warrami waxay la qaabileen Nabi Shuceyb iyo inta la jirtay oo mu'mininta ah, oyna ugu gooddiyeen inay ka eryi magaaladooda haddayna ku soo laaban diinta, ku noqoshada diintoodana waxay ula jeedaan dadkii ka baxay ee raacay Nabi Shucayb iyo xaqa illeen Nabi Shucayb marna diintooda ma haysane, ugu dambayntii way diideen mu'miniintii warkii gaalada mar hadduu Alle ka koriyey, waxayna talo saarteen Allehood kana baryeen inuu si xaq ah ku kala xukumo iyaga iyo gaalada xaqa diiday, taasina waxay ku tusin inay waajib tahay in xaqa lagu sugnaado laguna dhaganaado, Alle na la talo saarto isagaa xaakim caadil ahe oo cid walba marin waxay mudan tahaye. **[Al-Acraaf: 88-89].**

90. Waxayna dheheen madaxdii gaalowday oo qoomkiisii ka mida haddaad raacdaan Shucayb waa khasaarteen.

وَقَالَ ٱلْمَلَأُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مِن قَوْمِهِۦ لَئِنِ ٱتَّبَعْتُمْ شُعَيْبًا إِنَّكُمْ إِذًا لَّخَٰسِرُونَ ﴿٩٠﴾

91. Waxaase qabtay gariir waxayna ahaayeen kuwo guryahoodii ku dhintay (iyagoo lagdan).

فَأَخَذَتْهُمُ ٱلرَّجْفَةُ فَأَصْبَحُوا۟ فِى دَارِهِمْ جَٰثِمِينَ ﴿٩١﴾

92. Kuwii beeniyey Shucayb waxaad mooddaa inayna ku nagaannin magaaladaas dhexdeeda, kuwii beeniyey Shucaybna iyaga umbaa khasaaray.

ٱلَّذِينَ كَذَّبُوا۟ شُعَيْبًا كَأَن لَّمْ يَغْنَوْا۟ فِيهَا ۚ ٱلَّذِينَ كَذَّبُوا۟ شُعَيْبًا كَانُوا۟ هُمُ ٱلْخَٰسِرِينَ ﴿٩٢﴾

93. Markaasuu isaga jeedsaday oo yidhi: qoomkayow waan idin gaadhsiiyey farriintii Allahay,

فَتَوَلَّىٰ عَنْهُمْ وَقَالَ يَٰقَوْمِ لَقَدْ أَبْلَغْتُكُمْ رِسَٰلَٰتِ رَبِّى وَنَصَحْتُ لَكُمْ ۖ

فَكَيْفَ ءَاسَىٰ عَلَىٰ قَوْمٍ كَٰفِرِينَ ﴿٩٣﴾

waana idiin naseexeeyey ee sideen ugu walbahaari qoom gaala ah.

Alle wuxuu ka warrami gaalnimadooda iyo madax adayggooda iyo waxay dhex dabaalan oo baadinnimo ah, iyagoo isaga digay raacidda Nabi Shucayb oo ay khasaare ku sheegeen, waxaase qabatay gariir, waxayna ku dhinteen guryahoodii waxaadna mooddaa inayna xaq diidayaashu ku nagaannin halkaan, khasaarana iyaga umbuu ku dhacay, Nabi Shucaybna wuu isaga jeedsaday isagoo sheegay inuu gaadhsiiyey farriintii Alle una naseexeeyey uusanna u murgaynin, wax loo calaacalana ma aha cid intii xaqa si cad loo gaadhsiiyey looguna sharaxay haddana diidda, dulmi, madax adayg, xaq diiddo iyo dhibid dadka toosan iyo xaqaba ay dhibayaan darteed. **[Al-Acraaf: 90-93].**

وَمَآ أَرْسَلْنَا فِى قَرْيَةٍ مِّن نَّبِىٍّ إِلَّآ أَخَذْنَآ أَهْلَهَا بِٱلْبَأْسَآءِ وَٱلضَّرَّآءِ لَعَلَّهُمْ يَضَّرَّعُونَ ﴿٩٤﴾

94. Magaalo kasta oon Nabi u dirraba waxaan ku qabannay ehelkeeda cudurro iyo dhibaato inay khushuucaan (oo baryaan Alle).

ثُمَّ بَدَّلْنَا مَكَانَ ٱلسَّيِّئَةِ ٱلْحَسَنَةَ حَتَّىٰ عَفَواْ وَّقَالُواْ قَدْ مَسَّ ءَابَآءَنَا ٱلضَّرَّآءُ وَٱلسَّرَّآءُ فَأَخَذْنَٰهُم بَغْتَةً وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ ﴿٩٥﴾

95. Markaasaan u baddallaa meeshii xumaan (dhibka) wanaag (khayr) intay ka bataan oy dhahaan waxaa taabtay aabayaalkaanno dhibaato iyo farax, markaasaan ku qabannaa kado iyagoon ogayn.

وَلَوْ أَنَّ أَهْلَ ٱلْقُرَىٰٓ ءَامَنُواْ وَٱتَّقَوْاْ لَفَتَحْنَا عَلَيْهِم بَرَكَٰتٍ مِّنَ ٱلسَّمَآءِ وَٱلْأَرْضِ وَلَٰكِن كَذَّبُواْ فَأَخَذْنَٰهُم بِمَا كَانُواْ يَكْسِبُونَ ﴿٩٦﴾

96. Hadday dadka magaalooyinku rumeeyaan (xaqa) oo dhawrsadaan waxaan ku furi lahayn korkooda (sii dayn lahayn) barakada samada iyo dhulka, wayse beeniyeen (xaqii) waana qabannay waxay kasbanayeen dartiis.

أَفَأَمِنَ أَهْلُ ٱلْقُرَىٰٓ أَن يَأْتِيَهُم بَأْسُنَا بَيَٰتًا وَهُمْ نَآئِمُونَ ﴿٩٧﴾

97. Miyey ka aammin noqdeen dadka magaaladu inuu u yimaaddo dhibkannaga habeenkii iyagoo hurda.

98. Miyeyse ka aammin yihiin dadka magaaladu inuu u yimaaddo dhibkannagu barqinkii iyagoo ciyaari.

أَوَأَمِنَ أَهْلُ ٱلْقُرَىٰٓ أَن يَأْتِيَهُم بَأْسُنَا ضُحًى وَهُمْ يَلْعَبُونَ ﴿٩٨﴾

99. Ma waxay ka aammin noqdeen makriga Alle, cid khasaartay yaa ka aammin noqota makriga Alle.

أَفَأَمِنُوا۟ مَكْرَ ٱللَّهِ ۚ فَلَا يَأْمَنُ مَكْرَ ٱللَّهِ إِلَّا ٱلْقَوْمُ ٱلْخَٰسِرُونَ ﴿٩٩﴾

Adduunku waa guri imtixaam, dadkana waxaa lagu imtixaamaa dhib iyo khayrba inay xusuustaan Alle, haddii kale wuxuu ku qaban Alle kado iyagoon ogayn, hadduu dadku toosnaado oo xaqa raaco wuxuu Alle ugu deeqi lahaa khayr iyo barwaaqo, waxayse beeniyeen xaqii waxaana lagu ciqaabay dambigooda dartiis, mana habboona in laga aamin noqdo ciqaabta Alle illeen waxaa suurawda in ciqaabta Alle u timaaddo habeen ay hurdaan ama maalin ay ciyaari, illeen cid khasaartay umbaa ka aamin noqota oon xil iska saarin ka dhawrsashada ciqaabta Alle. Waxaana xadiith ah: "mu'minka xaalkiisu waa khayr, hadday dhib ku dhacdo wuu samraa khayrna wuu u noqdaa, hadduu wanaag helana wuu mahdiyaa oo khayr u noqdaa." Waana in saas loo gartaa xaalka, Allana lagu tiirsanaadaa. **[Al-Acraaf: 94-99].**

100. Miyeyna u caddaannin kuwa dhaxlaya dhulka ehelkiisa ka dib haddaan doonno waan qaban lahayn dambigooda dartiis, waxaannu daboolaynaa quluubtooda oyna wax maqlin.

أَوَلَمْ يَهْدِ لِلَّذِينَ يَرِثُونَ ٱلْأَرْضَ مِنۢ بَعْدِ أَهْلِهَآ أَن لَّوْ نَشَآءُ أَصَبْنَٰهُم بِذُنُوبِهِمْ ۚ وَنَطْبَعُ عَلَىٰ قُلُوبِهِمْ فَهُمْ لَا يَسْمَعُونَ ﴿١٠٠﴾

101. Taasi waa magaalooyinkii waxaanna kaaga qisoonaynaa warkoodii, waxayna ula timid rasuulladii xujooyin mana ayan rumayn beenintooda darteed horay, saasuuna u daboolaa Alle quluubta gaalada.

تِلْكَ ٱلْقُرَىٰ نَقُصُّ عَلَيْكَ مِنْ أَنۢبَآئِهَا ۚ وَلَقَدْ جَآءَتْهُمْ رُسُلُهُم بِٱلْبَيِّنَٰتِ فَمَا كَانُوا۟ لِيُؤْمِنُوا۟ بِمَا كَذَّبُوا۟ مِن قَبْلُ ۚ كَذَٰلِكَ يَطْبَعُ ٱللَّهُ عَلَىٰ قُلُوبِ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿١٠١﴾

102. Kamaannaan helin badankooda ballan, waxaanse hellay badankood iyagoo faasiqiina.

وَمَا وَجَدْنَا لِأَكْثَرِهِم مِّنْ عَهْدٍ ۖ وَإِن وَجَدْنَآ أَكْثَرَهُمْ لَفَٰسِقِينَ ﴿١٠٢﴾

Alle wuxuu halaagaa ciddii isla waynaata oo xaqa beenisa, waxaase habboon in ciddii dhaxasha ay waajib tahay inuu toosnaado oo hanuunsanaado si ayna ugu dhicin ciqaabta Alle, sidii qoomkii Nabi Nuux, Nabi Huud, Nabi Saalax, Nabi Luud iyo Nabi Shucayb, oo dhammaantood Nabiyadu ula yimaaddeen xujooyin cad, badankooduna xaqii bay diideen, waxayna muteen in la daabaco quluubtooda fasiqiinna noqdaan, taasina waxay caddayn in xaqa la raaco, lana digtoonaado, lana toosnaado. **[Al-Acraaf: 100-102].**

ثُمَّ بَعَثْنَا مِنۢ بَعْدِهِم مُّوسَىٰ بِـَٔايَٰتِنَآ إِلَىٰ فِرْعَوْنَ وَمَلَإِيْهِۦ فَظَلَمُوا۟ بِهَا ۖ فَٱنظُرْ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلْمُفْسِدِينَ ﴿١٠٣﴾

103. Markaasaan la bixinnay Nabi Muuse aayaadkanaga xagga fircoon iyo qoomkiisii, wayna dulmiyeen (diideen) ee day siday noqotay cidhibtii mufsidiinta.

وَقَالَ مُوسَىٰ يَٰفِرْعَوْنُ إِنِّى رَسُولٌ مِّن رَّبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿١٠٤﴾

104. Wuxuuna yidhi (Nabi) Muuse: Fircoonow anugu Rasuul Rabbiga caalamkaan ahay.

حَقِيقٌ عَلَىٰٓ أَن لَّآ أَقُولَ عَلَى ٱللَّهِ إِلَّا ٱلْحَقَّ ۚ قَدْ جِئْتُكُم بِبَيِّنَةٍ مِّن رَّبِّكُمْ فَأَرْسِلْ مَعِىَ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ﴿١٠٥﴾

105. Waxaana dhab ah inaan Alle ka sheegayn waxaan xaq ahayn, waxaana idiin la imid xujo Allihiin, ee u daa banii israa'iil la jirkayga

قَالَ إِن كُنتَ جِئْتَ بِـَٔايَةٍ فَأْتِ بِهَآ إِن كُنتَ مِنَ ٱلصَّٰدِقِينَ ﴿١٠٦﴾

106. Wuxuuna yidhi (Fircoon): haddaad la timid aayad keen haddaad run sheegi.

فَأَلْقَىٰ عَصَاهُ فَإِذَا هِىَ ثُعْبَانٌ مُّبِينٌ ﴿١٠٧﴾

107. Markaasuu tuuray ushiisii markaasay soo baxday iyadoo mas cad ah.

وَنَزَعَ يَدَهُۥ فَإِذَا هِىَ بَيْضَآءُ لِلنَّٰظِرِينَ ﴿١٠٨﴾

108. Wuxuuna siibay gacantiisii markaasay soo baxday iyadoo u cad dadka eegi.

Nabi Muuse wuxuu Alle u diray Fircoon iyo qoomkiisii isagoo aayado wata, wayse beeniyeen oo diideen, wuxuuna u sheegay Fircoon inuu Rasuul Alle yahay, dhabna waxaan xaq ahayn uusan sheegayn, xujana uu la yimid uuna warsaday inuu u daayo banii israa'iil, wuxuuse codsaday Fircoon sidii caadada u ahayd inuu xujo keeno hadduu run sheegi, wuxuuse u muujiyey ushii oo mas noqotay iyo gacantiisa oo cad cudur la'aan. Qisaduna saasay ku socotaa inta laga halaago fircoon iyo colkiisii xumaa. **[Al-Acraaf: 103-108].**

109. Waxay dheheen madaxdii qoomka Fircoon ka mid ahayd kani waa sixirroow aad u yaqaanna.

قَالَ ٱلْمَلَأُ مِن قَوْمِ فِرْعَوْنَ إِنَّ هَٰذَا لَسَٰحِرٌ عَلِيمٌ ﴿١٠٩﴾

110. Wuxuuna dooni inuu idinka bixiyo dhulkiinna ee maxaad faraysaan.

يُرِيدُ أَن يُخْرِجَكُم مِّنْ أَرْضِكُمْ ۖ فَمَاذَا تَأْمُرُونَ ﴿١١٠﴾

111. Waxayna dheheen dib u dhig (xaalkiisa) iyo walaalkiis, una dir magaalooyinka kuwo soo kulmiya.

قَالُوٓا۟ أَرْجِهْ وَأَخَاهُ وَأَرْسِلْ فِى ٱلْمَدَآئِنِ حَٰشِرِينَ ﴿١١١﴾

112. Oo kuu keena sixir badane kasta aadna u yaqaanna.

يَأْتُوكَ بِكُلِّ سَحَّارٍ عَلِيمٍ ﴿١١٢﴾

113. Waxayna u yimaaddeen sixirlayaashii Fircoon, waxayna dheheen ujuuro maleennahay haddaan annagu adkaanno.

وَجَآءَ ٱلسَّحَرَةُ فِرْعَوْنَ قَالُوٓا۟ إِنَّ لَنَا لَأَجْرًا إِن كُنَّا نَحْنُ ٱلْغَٰلِبِينَ ﴿١١٣﴾

114. Wuxuuna yidhi: haa, waxaadna noqonaysaan kuwa la soo dhaweeyo.

قَالَ نَعَمْ وَإِنَّكُمْ لَمِنَ ٱلْمُقَرَّبِينَ ﴿١١٤﴾

115. Waxayna dheheen: Muusow ama tuur ama aan tuurro.

قَالُوا۟ يَٰمُوسَىٰٓ إِمَّآ أَن تُلْقِىَ وَإِمَّآ أَن نَّكُونَ نَحْنُ ٱلْمُلْقِينَ ﴿١١٥﴾

116. Wuxuuna yidhi: tuura, markay tuureenna waxay sixreen indhaha dadka, wayna cabsi galiyeen waxayna la yimaaddeen sixir wayn.

قَالَ أَلْقُوا۟ ۖ فَلَمَّآ أَلْقَوْا۟ سَحَرُوٓا۟ أَعْيُنَ ٱلنَّاسِ وَٱسْتَرْهَبُوهُمْ وَجَآءُو بِسِحْرٍ عَظِيمٍ ﴿١١٦﴾

Saasaad u aragtaa markuu dambiile Fircoon xaqii beeniyey in madaxdii ka ag dhawaydna ay ku raaceen beenintii iyagoo ku sheegi Nabi Muuse inuu dooni inuu dadka dhulka ka bixiyo taasoo ay rabeen inay dadka khaldaan, waxayna dadkii ku dheheen wax na fara idinkaan idinka amar qaadanaynaaye, waxayna u soo jeediyeen in la sugo Muuse iyo walaalkii, dadka la soo kulmiyo cid kastoo

sixir taqaanna timaaddo, wayna u yimaaddeen fircoon iyagoo warsan ujuuro hadday adkaadaan, wuxuuna ugu yaboohay ujuuro iyo waliba u dhawaansho, waxayn tuureen wax ay indhaha dadka ku sixreen kuna cabsi galiyeen oo wayn. Taasina waxay ku tusin xaalkii Fircoon iyo colkiisii ee xumaa khaldanaana. **[Al-Acraaf: 109-116].**

117. Waxaanna u waxyoonay (Nabi) Muuse: tuur ushaada, waxaana soo baxday inay cunto waxay dhoobdhoobeen.

* وَأَوْحَيْنَآ إِلَىٰ مُوسَىٰٓ أَنْ أَلْقِ عَصَاكَ ۖ فَإِذَا هِيَ تَلْقَفُ مَا يَأْفِكُونَ ﴿١١٧﴾

118. Waxaana sugnaaday xaqii, waxaana buray waxay falayeen.

فَوَقَعَ ٱلْحَقُّ وَبَطَلَ مَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿١١٨﴾

119. Waxaana lagaga adkaaday gaaladii halkaas, waxayna noqdeen iyagoo dullaysan.

فَغُلِبُوا۟ هُنَالِكَ وَٱنقَلَبُوا۟ صَٰغِرِينَ ﴿١١٩﴾

120. Waxaana loo riday sixirlayaashii sujuud.

وَأُلْقِيَ ٱلسَّحَرَةُ سَٰجِدِينَ ﴿١٢٠﴾

121. Waxayna dheheen waxaan rumeynay Rabbiga caalamka.

قَالُوٓا۟ ءَامَنَّا بِرَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿١٢١﴾

122. Rabbiga Muuse iyo Haaruun.

رَبِّ مُوسَىٰ وَهَٰرُونَ ﴿١٢٢﴾

123. Wuxuuna yidhi Fircoon: miyaad rumeyseen Muuse, intaanan idiin idmin ka hor, arrintani waa dhagar aad ku dhagarteen magaalada si aad uga bixisaan xaggeeda dadkeeda, waad ogaan doontaan.

قَالَ فِرْعَوْنُ ءَامَنتُم بِهِۦ قَبْلَ أَنْ ءَاذَنَ لَكُمْ ۖ إِنَّ هَٰذَا لَمَكْرٌ مَّكَرْتُمُوهُ فِى ٱلْمَدِينَةِ لِتُخْرِجُوا۟ مِنْهَآ أَهْلَهَا ۖ فَسَوْفَ تَعْلَمُونَ ﴿١٢٣﴾

124. Waxaan u goyn gacmihiinna iyo lugahiinna isdhaaf, waana idin wadhi dhammaantiin.

لَأُقَطِّعَنَّ أَيْدِيَكُمْ وَأَرْجُلَكُم مِّنْ خِلَٰفٍ ثُمَّ لَأُصَلِّبَنَّكُمْ أَجْمَعِينَ ﴿١٢٤﴾

125. Waxayna dheheen xagga Rabbigeen ayaan u noqonaynaa.

قَالُوٓا۟ إِنَّآ إِلَىٰ رَبِّنَا مُنقَلِبُونَ ﴿١٢٥﴾

126. Ma jiro waxaad nagu nacayso oon ahayn inaan rumaynay aayaadka Rabbigeen, markay noo yimaaddeen. Allow samir naga buuxi na dilna annagoo muslimiina.

وَمَا تَنقِمُ مِنَّآ إِلَّآ أَنْ ءَامَنَّا بِـَٔايَـٰتِ رَبِّنَا لَمَّا جَآءَتْنَا ۚ رَبَّنَآ أَفْرِغْ عَلَيْنَا صَبْرًا وَتَوَفَّنَا مُسْلِمِينَ ﴿١٢٦﴾

Waxaa sugnaaday xaqii xumaantiina waa burtay, gaaladiina waa laga adkaaday iyagoo dullaysan, sixirlayaashiina way rumeeyeen xaqii, wuxuuse ku guul guulay Fircoon arrintaas, wuxuuna sheegay inay rumeeyeen xaqa isagoon u idmin, wuxuuna ugu gooddiyey inuu ciqaabi oo gooyn gacmaha iyo lugaha, wadhina, wayse calool adaygeen, Alle na warsadeen samir iyo adkaysi illeen waxaan xaqa rumayntiis ahayn Fircoon kuma nicine, kuna oofsado Alle iyagoo muslimiina.Waana kaas xaqa iyo xumaan waligeed, waana kaas fircoon iyo isla waynidiisii, waana kaas xaq oo lagu sugnaado iyo rumayn aayaadkiisa dhaba. **[A1-acraaf: 117-126].**

127. Waxay dheheen madaxdii oo qoomkii Fircoona: ma ku dayn Muuse iyo qoomkiisa inay fasaadiyaan dhulka oo uu isaga tago (Muuse) adiyo ilaahyadaada aad caabudayso. Wuxuna yidhi waxaannu dili wiilashooda waxaannu dayn gabdhahooda, annagaana ka sarrayna oo dullayn.

وَقَالَ ٱلْمَلَأُ مِن قَوْمِ فِرْعَوْنَ أَتَذَرُ مُوسَىٰ وَقَوْمَهُۥ لِيُفْسِدُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ وَيَذَرَكَ وَءَالِهَتَكَ ۚ قَالَ سَنُقَتِّلُ أَبْنَآءَهُمْ وَنَسْتَحْىِۦ نِسَآءَهُمْ ۚ وَإِنَّا فَوْقَهُمْ قَـٰهِرُونَ ﴿١٢٧﴾

128. Muusana wuxuu ku yidhi qoomkiisa: kaalmaysta Alle, samrana, dhulka Alle ayaa iska leh, wuxuuna dhaxalsiin cidduu doono oo addoomadiisa ka mida, cidhibta (fiicanna) waxaa iska leh kuwa dhawrsada.

قَالَ مُوسَىٰ لِقَوْمِهِ ٱسْتَعِينُوا۟ بِٱللَّهِ وَٱصْبِرُوٓا۟ ۖ إِنَّ ٱلْأَرْضَ لِلَّهِ يُورِثُهَا مَن يَشَآءُ مِنْ عِبَادِهِۦ ۖ وَٱلْعَـٰقِبَةُ لِلْمُتَّقِينَ ﴿١٢٨﴾

129. Waxayna ku dhaheen waa nala dhibay ka hor imaatinkaaga iyo

قَالُوٓا۟ أُوذِينَا مِن قَبْلِ أَن تَأْتِيَنَا وَمِنۢ بَعْدِ

ka dib imaatinkaaga, wuxuuna (Nabi Muuse) ku yidhi waxay u dhawdahay in Allihiin halaago cadawgiinna oo dhulka idinku reebo si uu u eego waxaad fashaan.

مَا جِئْتَنَا ۖ قَالَ عَسَىٰ رَبُّكُمْ أَن يُهْلِكَ عَدُوَّكُمْ وَيَسْتَخْلِفَكُمْ فِى ٱلْأَرْضِ فَيَنظُرَ كَيْفَ تَعْمَلُونَ ﴿١٢٩﴾

Madaxdii xumayd ee Fircoon ka ag dhawayd waxay Fircoon u jeediyeen arrin ah ma waxaad dayn Muuse iyo qoomkiisa inay fasaadiyaan dhulka adna ay kaa daayaan cibaadada, ilaahyadaadana aanay caabudin, waxaana la sheegay in fircoon lahaa ilaahyo uu qarsoodi ku caabudi jiray, wuxuuse ugu jawaabay waxay rabeen oo ah inuu Muuse iyo qoomkiisa ka adag yahay kana sarreeyo, waana faan jaahil aan wax garanayn. Nabi Muuse isagu wuxuu u jeedsaday xagga Alle wuxuuna faray qoomkiisa inay kaalmaystan Alle samraanna ogaadaanna in dhulka Alle leeyahay una reebi cidduu doono oo addoommadiisa ka mida, cidhibta fiicanna ay yeelan kuwa dhawrsada, waxaase calaacalay qoomkiisii oo sheegay in mar kasta la dhibay, wuxuuna ku calool adkaysiiyey inay u dhawdahay in Alle halaago cadowgooda oo dhulka iyaga u reebo imtixaan dartiis iyo inuu eego waxay falaan, waana taas xaqa iyo xumaan iyo mu'min iyo gaal xaalkiisu. **[Al-Acraaf: 127-129].**

130. Waxaan ku qabannay fircoon ehelkiisii abaar iyo nusqaan midhaha, inay wax xusuustaan.

وَلَقَدْ أَخَذْنَآ ءَالَ فِرْعَوْنَ بِٱلسِّنِينَ وَنَقْصٍ مِّنَ ٱلثَّمَرَٰتِ لَعَلَّهُمْ يَذَّكَّرُونَ ﴿١٣٠﴾

131. Hadduu wanaag u yimaaddo waxay dhahaan annagaa leh tan (mudan), hadday dhibato ku dhacdana waxay sharaystaan Muuse iyo inta la jirta, baaskoodu wuxuu uun jiraa Alle agtiisa, badankooduse ma oga.

فَإِذَا جَآءَتْهُمُ ٱلْحَسَنَةُ قَالُوا۟ لَنَا هَٰذِهِۦ ۖ وَإِن تُصِبْهُمْ سَيِّئَةٌ يَطَّيَّرُوا۟ بِمُوسَىٰ وَمَن مَّعَهُۥٓ ۗ أَلَآ إِنَّمَا طَٰٓئِرُهُمْ عِندَ ٱللَّهِ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٣١﴾

132. Waxayna dheheen wax kasta oo aayad ah ood noola timaaddo inaad nagu sixirto annagu kuma rumaynayno.

وَقَالُوا۟ مَهْمَا تَأْتِنَا بِهِۦ مِنْ ءَايَةٍ لِّتَسْحَرَنَا بِهَا فَمَا نَحْنُ لَكَ بِمُؤْمِنِينَ ﴿١٣٢﴾

فَأَرْسَلْنَا عَلَيْهِمُ ٱلطُّوفَانَ وَٱلْجَرَادَ وَٱلْقُمَّلَ وَٱلضَّفَادِعَ وَٱلدَّمَ ءَايَٰتٍ مُّفَصَّلَٰتٍ فَٱسْتَكْبَرُوا۟ وَكَانُوا۟ قَوْمًا مُّجْرِمِينَ ﴿١٣٣﴾

133. Markaasaan ku dirray daad, ayax, suus iyo rah iyo dhiig aayaad cad iyagoo ah, wayna iskibriyeen waxayna ahaayeen qoom dambiilayaal ah.

وَلَمَّا وَقَعَ عَلَيْهِمُ ٱلرِّجْزُ قَالُوا۟ يَٰمُوسَى ٱدْعُ لَنَا رَبَّكَ بِمَا عَهِدَ عِندَكَ ۖ لَئِن كَشَفْتَ عَنَّا ٱلرِّجْزَ لَنُؤْمِنَنَّ لَكَ وَلَنُرْسِلَنَّ مَعَكَ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ﴿١٣٤﴾

134. Markuu ku dhacay korkooda cadaabku waxay dheheen: Muusow noo bari Allehaa wuxuu kugula ballamay, haddaad naga fayddo cadaabka wannu ku rumayn, waxaana la diri (u dayn) la jirkaaga banii israa'iil.

فَلَمَّا كَشَفْنَا عَنْهُمُ ٱلرِّجْزَ إِلَىٰٓ أَجَلٍ هُم بَٰلِغُوهُ إِذَا هُمْ يَنكُثُونَ ﴿١٣٥﴾

135. Markaan ka faydnay cadaabkii tan iyo muddo ay gaadhayaan yey ahaadeen kuwo buriya (ballankii).

Alle wuxuu ku qabtay Fircoon iyo qoomkiisii abaar iyo beerihii oo ka nusqaamay bal inay waantoobaan, waxaase dhacday in marka wanaag u yimaadana ay sheegtaan inay mudan yihiin, haddii xumaani taabatana ay baasaystaan Nabi Muuse iyo inta la jirta, mase oga in dhibaatadu uga imaan xagga Alle, markaasay caddeeyeen warkii oo u sheegeen Nabi Muuse iyo dadkii rumeeyey wax kasta oo calaamada oo loo keeno inayna rumaynayn, markaasaa Alle ku sii daayey daad, cayayaan, rah, ayax iyo dhiig oo ah calaamooyin cad cad, wayse iska kibriyeen, waxayna noqdeen dambiilayaal, markuu dhibku ku dhacayna waxay u sheegeen Nabi Muuse in haddii dhibka laga faydo ay rumayn xaqa, wayse beeniyeen ballankii. Taasina waxay ku tusin awoodda Alle iyo siduu wax u ciqaabo, iyo xumaanta gaalada iyo madax adayggooda, waxaase habboon in xaqa la raaco. **[Al-Acraaf: 130-135].**

فَٱنتَقَمْنَا مِنْهُمْ فَأَغْرَقْنَٰهُمْ فِى ٱلْيَمِّ بِأَنَّهُمْ كَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا وَكَانُوا۟ عَنْهَا غَٰفِلِينَ ﴿١٣٦﴾

136. Waan ka aarsannay gaaladii waxaanna ku maanshaynay badda, illeen waxay beeniyeen aayaadkanaga, wayna halmaameen.

137. Waxaanna dhaxalsiinnay qoomkii ahaa kuwa la dullaysto bariga dhulka (shaam) iyo galbeedkiisa een barakaynay dhexdiisa, wayna u dhammaatay kalimada (yaboohii) Allehaa ee wanaagsanaa banuu israa'iil samirkoodii dartiis. Waxaana baabi'innay wuxuu samaynayey Fircoon iyo qoomkiisii iyo waxay dhisayeen.

وَأَوْرَثْنَا ٱلْقَوْمَ ٱلَّذِينَ كَانُوا۟ يُسْتَضْعَفُونَ مَشَـٰرِقَ ٱلْأَرْضِ وَمَغَـٰرِبَهَا ٱلَّتِى بَـٰرَكْنَا فِيهَا ۖ وَتَمَّتْ كَلِمَتُ رَبِّكَ ٱلْحُسْنَىٰ عَلَىٰ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ بِمَا صَبَرُوا۟ ۖ وَدَمَّرْنَا مَا كَانَ يَصْنَعُ فِرْعَوْنُ وَقَوْمُهُۥ وَمَا كَانُوا۟ يَعْرِشُونَ ﴿١٣٧﴾

138. Waxaana tallaabinay banuu israa'iil baddii waxayna u yimaadeen qoom ku nagi sanamyadoodii markaasay dheheen: Muusow noo yeel ilaah siday iyaba ilaahyo u yeesheen wuxuuna ku yidhi: idinku waxaad tihiin qoom jaahiliina.

وَجَـٰوَزْنَا بِبَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ٱلْبَحْرَ فَأَتَوْا۟ عَلَىٰ قَوْمٍ يَعْكُفُونَ عَلَىٰٓ أَصْنَامٍ لَّهُمْ ۚ قَالُوا۟ يَـٰمُوسَى ٱجْعَل لَّنَآ إِلَـٰهًا كَمَا لَهُمْ ءَالِهَةٌ ۚ قَالَ إِنَّكُمْ قَوْمٌ تَجْهَلُونَ ﴿١٣٨﴾

139. Kuwaas waa lagu halaagi waxay ku sugan yihiin waana baadil waxay fali.

إِنَّ هَـٰٓؤُلَآءِ مُتَبَّرٌ مَّا هُمْ فِيهِ وَبَـٰطِلٌ مَّا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿١٣٩﴾

Alle wuxuu ka warrami in markay gaaladu madax adaygeen xaqii uu halaagay, baddana ku maansheeyey, Fircoon iyo qoomkiisiina saasay ku halaagsameen, waxaana dhulkii ku soo hadhay dadkii la dullaysan jiray, wayna dhaxleen dhulkii barakaysnaa, waxaana la halaagay fircoon iyo qoomkiisii iyo waxay dhisayeen, waxaase dhacay in kuwii jaahiliinta ahaa ee banuu israa'iil ay warsadeen Nabi Muuse inuu ilaahyo u yeelo sida kuwa ay arkeen oo caabudayey sanamyo, una sheegay inay jaahiliin yihiin, waxay kuwaasu falina khasaare iyo baadhil yahay, waxaa sugnaatay in dad u yimaadeen Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) kuna dhaheen: noo samee geed sida gaaladu u leedahay geed ay hubka surtaan. Markaasuu yidhi Alle ayaa wayn waa waxay ku dhaheen banii israa'iil Nabi Muuse ilaah noo yeel siday ilaah u leeyihiin, waxaad qaadaysaan jidkii kuwii hore, taasina waxay muujin in xaqa layskaga daydo ee aan xumaan iyo dambi layska raacin layskagana dayanin. **[Al-Acraaf: 136-139].**

قَالَ أَغَيۡرَ ٱللَّهِ أَبۡغِيكُمۡ إِلَٰهٗا وَهُوَ فَضَّلَكُمۡ عَلَى ٱلۡعَٰلَمِينَ ١٤٠

140. Wuxuu yidhi ma wax Alle ka soo hadhay yaan ilaahnimo idiinka doonaa isagoo idinka fadilay caalamkan (jooga).

وَإِذۡ أَنجَيۡنَٰكُم مِّنۡ ءَالِ فِرۡعَوۡنَ يَسُومُونَكُمۡ سُوٓءَ ٱلۡعَذَابِ يُقَتِّلُونَ أَبۡنَآءَكُمۡ وَيَسۡتَحۡيُونَ نِسَآءَكُمۡۚ وَفِي ذَٰلِكُم بَلَآءٞ مِّن رَّبِّكُمۡ عَظِيمٞ ١٤١

141. Xusuusta markaan idinka korinnay Fircoon dadkiisii iyagoo idin dhadhansiiyey cadaab xun, oo laynayey wiilashiinna daynayeyna gabdhihiinna, arrintaasna waxaa ku sugan ibtilo Allihiin xaggiisa ka ahaatay oo wayn.

* وَوَٰعَدۡنَا مُوسَىٰ ثَلَٰثِينَ لَيۡلَةٗ وَأَتۡمَمۡنَٰهَا بِعَشۡرٖ فَتَمَّ مِيقَٰتُ رَبِّهِۦٓ أَرۡبَعِينَ لَيۡلَةٗۚ وَقَالَ مُوسَىٰ لِأَخِيهِ هَٰرُونَ ٱخۡلُفۡنِي فِي قَوۡمِي وَأَصۡلِحۡ وَلَا تَتَّبِعۡ سَبِيلَ ٱلۡمُفۡسِدِينَ ١٤٢

142. Waxaan u yaboohnay Nabi Muuse soddan habeen waxaana ku dhammaystirray toban. Wuxuuna ku dhammaaday ballankii Allehiis afartan habeen, wuxuuna ku yidhi Nabi Muuse walaalkiis Haaruun iiga dambee qoomkayga wanaajina hana raacin jidka mufsidiinta.

Wuxuu xusuusiyey Nabi Muuse qoomkii nicmooyinka Alle iyo siduu fircoon uga koriyey isagoo wiilashana laynayey, gabdhahana daynayey si uu u dullaysto, markaasaa Alle u yaboohay Nabi Muuse kitaabkii tawreed, siiyeyna muddo afartan habeena si uu Alle la hadalkiisa ugu darbado, waxaana intaas la sii joogay dadkii walaalkiis Nabi Haaruun oo uu u dardaarmay inuu wanaajiyo dadka xumaanna ku raacin. Taasina waxay ku tusin in khayrka laysku baraarujiyo, illeen Haaruunba Nabi buu ahaaye. **[Al-Acraaf: 140-142].**

وَلَمَّا جَآءَ مُوسَىٰ لِمِيقَٰتِنَا وَكَلَّمَهُۥ رَبُّهُۥ قَالَ رَبِّ أَرِنِيٓ أَنظُرۡ إِلَيۡكَۚ قَالَ لَن تَرَىٰنِي وَلَٰكِنِ ٱنظُرۡ إِلَى ٱلۡجَبَلِ فَإِنِ ٱسۡتَقَرَّ مَكَانَهُۥ فَسَوۡفَ تَرَىٰنِيۚ فَلَمَّا تَجَلَّىٰ رَبُّهُۥ لِلۡجَبَلِ جَعَلَهُۥ دَكّٗا

143. Markuu u yimid Nabi Muuse ballankannagii oo uu Rabbigiis la hadlay, wuxuu yidhi: Allow is kay tus aan ku arkee, wuxuuna yidhi Alle: ima arkaysid ee day buurta hadday meesheeda ku sugnaato markaasaad

وَخَرَّ مُوسَىٰ صَعِقًا ۚ فَلَمَّآ أَفَاقَ قَالَ سُبْحَٰنَكَ تُبْتُ إِلَيْكَ وَأَنَا۠ أَوَّلُ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٤٣﴾

i arki, markuu Alle u daahiray buurtii wuxuu ka yeelay burbur waxaana dhacay Nabi Muuse suuxdin darteed, markuu miyirsadayna wuxuu yidhi: (Allow adaa) nasahan waan kuu toobad keenay waxaan ahay mu'miniinta kan ugu horreeya (waqtigan inaan adduunka lagugu arkayn).

قَالَ يَٰمُوسَىٰٓ إِنِّى ٱصْطَفَيْتُكَ عَلَى ٱلنَّاسِ بِرِسَٰلَٰتِى وَبِكَلَٰمِى فَخُذْ مَآ ءَاتَيْتُكَ وَكُن مِّنَ ٱلشَّٰكِرِينَ ﴿١٤٤﴾

144. Wuxuu yidhi Alle: Muusow waxaan kaa doortay dadka (sabankan) diriddayda iyo la hadalkayga dartiis ee qaado waxaan ku siiyey ahowna kuwa mahdiya.

وَكَتَبْنَا لَهُۥ فِى ٱلْأَلْوَاحِ مِن كُلِّ شَىْءٍ مَّوْعِظَةً وَتَفْصِيلًا لِّكُلِّ شَىْءٍ فَخُذْهَا بِقُوَّةٍ وَأْمُرْ قَوْمَكَ يَأْخُذُوا۟ بِأَحْسَنِهَا ۚ سَأُو۟رِيكُمْ دَارَ ٱلْفَٰسِقِينَ ﴿١٤٥﴾

145. Waxaan ugu qorray alwaaxda wax kastoo wacdi iyo caddayna, ee ku qaado niyad adag farna qoomkaaga inay qaataan, ha qaataan teeda fiicane, waxaan idin tusin guryihii faasiqiinta.

Nabi Muuse markuu ku yimid muddadii oo Alle la hadlay yuu ka baryey inuu arko, Alle se sarreeye wuxuu u sheegay inuusan arkayn, markuu buurtii u daahirayna ay burburtay, Nabi Muusana suuxay markuu miyirsadayna uu wayneeyey Alle oo nasahay, markaas Alle xusuusiyey siduu u doortay uuna faray inuu qabsado waxa loo waxyooday ee waanada iyo caddaynta ah, qoomkiisana faro inay aad u qabsadaan, wuxuuna tusay guryihii kuwii faasiqiinta ahaa ee la halaagay. Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: dadku way suuxi qiyaamada anaana u soo hor miyirsan markaasaan arkaa Nabi Muuse oo carshiga haysta, marka ma ogi inuu hortay soo miyirsaday iyo inuu ka mid yahay kuwa Alle ka soo reebay, taasina waxay ku tusin sharafta Nabigeenna iyo Nabi Muusaba, iyadoo Nabiyaduba, sharaf wada leeyihiin. **[Al-Acraaf: 143-145].**

سَأَصْرِفُ عَنْ ءَايَٰتِىَ ٱلَّذِينَ يَتَكَبَّرُونَ فِى ٱلْأَرْضِ بِغَيْرِ ٱلْحَقِّ وَإِن يَرَوْا۟

146. Waxaan ka iilaa aayaadkayga kuwa isku kibriya dhulka xaq darro, hadday arkaan aayad

كُلَّ ءَايَةٍ لَّا يُؤْمِنُواْ بِهَا وَإِن يَرَوْاْ سَبِيلَ ٱلرُّشْدِ لَا يَتَّخِذُوهُ سَبِيلًا وَإِن يَرَوْاْ سَبِيلَ ٱلْغَيِّ يَتَّخِذُوهُ سَبِيلًا ۚ ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ كَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِنَا وَكَانُواْ عَنْهَا غَٰفِلِينَ ﴿١٤٦﴾

kasta ma rumeeyaan hadday arkaan jidka hanuunka kama yeeshaan waddo, hadday arkaan waddada baadidana waxay ka yeeshaan jid, waxaana ugu wacan inay beeniyeen aayaadkannaga oy ahaayeen kuwo halmaamay.

وَٱلَّذِينَ كَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِنَا وَلِقَآءِ ٱلْـَٔاخِرَةِ حَبِطَتْ أَعْمَٰلُهُمْ ۚ هَلْ يُجْزَوْنَ إِلَّا مَا كَانُواْ يَعْمَلُونَ ﴿١٤٧﴾

147. Kuwa beeniyeen aayaadkannaga iyo la kulankannaga aakhiro waxaa buray camalyaalkooda, miyaase laga abaal mariyaa waxay camal falayeen mooyee.

وَٱتَّخَذَ قَوْمُ مُوسَىٰ مِنۢ بَعْدِهِۦ مِنْ حُلِيِّهِمْ عِجْلًا جَسَدًا لَّهُۥ خُوَارٌ ۚ أَلَمْ يَرَوْاْ أَنَّهُۥ لَا يُكَلِّمُهُمْ وَلَا يَهْدِيهِمْ سَبِيلًا ٱتَّخَذُوهُ وَكَانُواْ ظَٰلِمِينَ ﴿١٤٨﴾

148. Waxay ka yeesheen qoomkii Nabi Muuse gadaashiis jawhartoodii dibi cod leh, miyeyna arkaynin inuusan la hadlaynin kuna toosinaynin jid, way yeesheen iyagoo daalimiin ah.

وَلَمَّا سُقِطَ فِىٓ أَيْدِيهِمْ وَرَأَوْاْ أَنَّهُمْ قَدْ ضَلُّواْ قَالُواْ لَئِن لَّمْ يَرْحَمْنَا رَبُّنَا وَيَغْفِرْ لَنَا لَنَكُونَنَّ مِنَ ٱلْخَٰسِرِينَ ﴿١٤٩﴾

149. Marki ay shallaayeen (nidaamoodeen) oy arkeen inay dhumeen waxay dhaheen hadduusan noo naxariisan Rabbigeen oosan noo dambi dhaafin waxaan noqonaynaa kuwo khasaara.

Xaqa waxaa laga leexin kuwa iskibriya oon xaqa rumayn, hadday xumaan arkaanna raaci, illeen waxay beeniyeen oo halmaameen aayaadka Alle, kuwa beeniya aayaadka Alle iyo la kulankiisana waxaa buri camalkooda. Sufyaan binu cuyeyna wuxuu yidhi: waxaa laga siibay fahmidda quraanka markaasaa laga leexiyey. Aayadaha kale waxay ka warrami in qoomkii Nabi Muuse intuu ka maqnaa ka yeesheen dibi waxay caabudaan, waana doqonnimo illeen wax ma taree, markay arkeen inay khasaareenna waxay sheegeen haddaan Alle u dhaafin una naxariisan inay dhab u khasaareen. **[Al-Acraaf: 146-149].**

وَلَمَّا رَجَعَ مُوسَىٰٓ إِلَىٰ قَوْمِهِۦ غَضْبَٰنَ أَسِفًا قَالَ بِئْسَمَا خَلَفْتُمُونِى مِنۢ بَعْدِىٓ ۖ أَعَجِلْتُمْ أَمْرَ رَبِّكُمْ ۖ وَأَلْقَى ٱلْأَلْوَاحَ وَأَخَذَ بِرَأْسِ أَخِيهِ يَجُرُّهُۥٓ إِلَيْهِ ۚ قَالَ ٱبْنَ أُمَّ إِنَّ ٱلْقَوْمَ ٱسْتَضْعَفُونِى وَكَادُوا۟ يَقْتُلُونَنِى فَلَا تُشْمِتْ بِىَ ٱلْأَعْدَآءَ وَلَا تَجْعَلْنِى مَعَ ٱلْقَوْمِ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿١٥٠﴾

150. Markuu ku soo noqday Nabi Muuse qoomkiisii isagoo cadhaysan oo walbahaarsan wuxuu yidhi waxaa xun waxaad iiga dambeyseen gadaashay, ma waxaad dadajiisateen amarkii Allihiin, wuxuuna tuuray alwaaxdii, wuxuuna qabtay madaxa walaalkiis isagoo xaggiisa u jiidi, wuxuuna yidhi: ina hooyoow qoomku way i tabaryaraysteen waxayna u dhawaadeen inay i dilaan ee ha igaga farxin colka hana iga yeelin la jirka qoomka daalimiinta ah.

قَالَ رَبِّ ٱغْفِرْ لِى وَلِأَخِى وَأَدْخِلْنَا فِى رَحْمَتِكَ ۖ وَأَنتَ أَرْحَمُ ٱلرَّٰحِمِينَ ﴿١٥١﴾

151. Wuxuuna yidhi Nabi Muuse: Allow u dambi dhaaf ani iyo walaalkay nana gali naxariistaada adaa naxariis badane ahe.

إِنَّ ٱلَّذِينَ ٱتَّخَذُوا۟ ٱلْعِجْلَ سَيَنَالُهُمْ غَضَبٌ مِّن رَّبِّهِمْ وَذِلَّةٌ فِى ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا ۚ وَكَذَٰلِكَ نَجْزِى ٱلْمُفْتَرِينَ ﴿١٥٢﴾

152. Kuwa yeeshay dibi waxaa gaadhi cadho Rabbigood iyo dulli nolosha adduunyo, saasaanna ku abaal marinnaa been abuurtayaasha.

وَٱلَّذِينَ عَمِلُوا۟ ٱلسَّيِّـَٔاتِ ثُمَّ تَابُوا۟ مِنۢ بَعْدِهَا وَءَامَنُوٓا۟ إِنَّ رَبَّكَ مِنۢ بَعْدِهَا لَغَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٥٣﴾

153. Kuwa falay xumaan markaas toobad keenay intaas ka dib oo rumeeyey xaqa, Allehaa intaas ka dib waa dambi dhaafe naxariista.

Markuu Nabi Muuse ku soo noqday qoomkiisii isagoo cadhaysan oo ka walbahaarsan waxay faleen wuxuu ku yidhi: waxaa xun waxaad iiga dambeyseen, ma waxaad dedejisataeen amarkkii Alle, wuxuuna cadho la tuuray alwaaxdii, wuxuuna madaxa qabtay walaalkiis Haaruun oo uu ku dhaafay gadaashii wuuna jiiday. Markaasuu calaacalay oo ku yidhi ina hooyo

madaxa hay qabannin, qoomkii way i liideen ina dili gaadheen, colka ha igaga farxin, daalimiintana haygala mid dhigin, markuu ogaaday inuu walaalkii dambi la'aan yahay yuu u dambi dhaaf warsaday naftiisa iyo walaalkiis. Kuwa dibiga caabuday Alla wuu u cadhooday oo dulleeyey waana abaalka been abuurayaasha, ciddiise xumaan fasha oo toobad keenta oo xaqa rumaysa Alle wuu u dambi dhaafi. Abuu Qilaabo wuxuu yidhi: waxaa dulli mudan been abuurte oo dhan. **[Al-Acraaf: 150-153].**

وَلَمَّا سَكَتَ عَن مُّوسَى ٱلْغَضَبُ أَخَذَ ٱلْأَلْوَاحَ ۖ وَفِى نُسْخَتِهَا هُدًى وَرَحْمَةٌ لِّلَّذِينَ هُمْ لِرَبِّهِمْ يَرْهَبُونَ ﴿١٥٤﴾

154. Markay cadhadu ka xasishay Nabi Muuse wuxuu qaatay alwaaxdii waxaana ku qorraa hanuun iyo naxariis u ah kuwa Rabbigood ka cabsan.

وَٱخْتَارَ مُوسَىٰ قَوْمَهُۥ سَبْعِينَ رَجُلًا لِّمِيقَٰتِنَا ۖ فَلَمَّآ أَخَذَتْهُمُ ٱلرَّجْفَةُ قَالَ رَبِّ لَوْ شِئْتَ أَهْلَكْتَهُم مِّن قَبْلُ وَإِيَّىَّ ۖ أَتُهْلِكُنَا بِمَا فَعَلَ ٱلسُّفَهَآءُ مِنَّآ ۖ إِنْ هِىَ إِلَّا فِتْنَتُكَ تُضِلُّ بِهَا مَن تَشَآءُ وَتَهْدِى مَن تَشَآءُ ۖ أَنتَ وَلِيُّنَا فَٱغْفِرْ لَنَا وَٱرْحَمْنَا ۖ وَأَنتَ خَيْرُ ٱلْغَٰفِرِينَ ﴿١٥٥﴾

155. Wuxuu ka doortay Nabi Muuse qoomkiisa toddobaatan nin ballankannaga dartiis, markay qabatay gariirku wuxuu yidhi: Allow haddaad doonto waad halaagi lahayd horay iyaga iyo anigaba, ma waxaad noo halaagi waxay faleen sufaho naga mida, waa imtixaankaaga, ciddaad doontana waad dhumisaa, kaad dontana waad hanuunisaa, adaa wali noo ah ee noo dambi dhaaf, noona naxariiso, adaa dambi dhaafkaagu khayr roon yahay oo badan yahay.

* وَٱكْتُبْ لَنَا فِى هَٰذِهِ ٱلدُّنْيَا حَسَنَةً وَفِى ٱلْءَاخِرَةِ إِنَّا هُدْنَآ إِلَيْكَ ۚ قَالَ عَذَابِىٓ أُصِيبُ بِهِۦ مَنْ أَشَآءُ ۖ وَرَحْمَتِى وَسِعَتْ كُلَّ شَىْءٍ ۚ فَسَأَكْتُبُهَا لِلَّذِينَ يَتَّقُونَ وَيُؤْتُونَ ٱلزَّكَوٰةَ وَٱلَّذِينَ هُم بِـَٔايَٰتِنَا يُؤْمِنُونَ ﴿١٥٦﴾

156. Noona qor adduunyadan wanaag iyo aakhiraba waannu kuu noqonnaye, wuxuu yidhi cadaabkaygu wuxuu ku dhici ciddaan doono, naxariistayduna waxay u waasac noqotay wax kasta, waxaana u qori kuwa dhawrsada oo bixiya zakada iyo kuwa aayaadkaygana rumeeya.

Markay cadhadii ka ba'day Nabi Muuse wuxuu qaatay looxdii oo hanuun iyo naxariis ku qoran tahay, kuna waantoobi ciddii cabsan, wuxuuna doortay toddobaatan qoomkiisii ka mida inay Alle u toobadkeenaan, markuu gariirkii qabtayna wuxuu ku calaacalay in hadduu Alle doono uu halaagi lahaa mar hore, haddase ma waxaa naloo halaagi wax kuwo xun oo naga mida faleen, Allow waa imtixaamkaagii, ciddaad doontana waad dhumisaa taad doontana waad hanuunisaa, adaana wali noo ah, ee noo dambi dhaaf noona naxariiso, adaa dambi dhaafe khayr roon ahe, noona qor adduun iyo akharaba wanaag, waan kuu toobad keennaye, wuxuuna u sheegay Alle inuu cadaabkiisu ku dhici cidduu doono, naxariistiisuna wax kasta u waasac tahay, khayrna mudan kuwa dhawrsada oo bixiya zakada, rumeeyana aayaadka Alle. Taasina waxay ku tusin waasacnimada naxariista Alle iyo in lagu dadaalo sidii loo heli lahaa. **[Al-Acraaf: 154-156].**

157. Ee ah kuwa raaca Rasuulka Nabiga ah ee ummiga ah ee ah kay ka helayeen isagoo ku qoran agtooda tawreed iyo injiil, farana wanaagga kana reeba xumaanta una banneeya wanaagga (xalaasha) kana xarrima xumaanta (xaaraanta) kana dejiya culayskii iyo xadhkihii korkooda ahaa, kuwa rumeeyey Nabigaas oo qaddariyey oo u gargaaray oo raacay nuurka lagu soo dejiyey kuwaasu waa uun kuwa liibaanay.

الَّذِينَ يَتَّبِعُونَ الرَّسُولَ النَّبِيَّ الْأُمِّيَّ الَّذِي يَجِدُونَهُ مَكْتُوبًا عِندَهُمْ فِي التَّوْرَاةِ وَالْإِنجِيلِ يَأْمُرُهُم بِالْمَعْرُوفِ وَيَنْهَاهُمْ عَنِ الْمُنكَرِ وَيُحِلُّ لَهُمُ الطَّيِّبَاتِ وَيُحَرِّمُ عَلَيْهِمُ الْخَبَائِثَ وَيَضَعُ عَنْهُمْ إِصْرَهُمْ وَالْأَغْلَالَ الَّتِي كَانَتْ عَلَيْهِمْ ۚ فَالَّذِينَ آمَنُوا بِهِ وَعَزَّرُوهُ وَنَصَرُوهُ وَاتَّبَعُوا النُّورَ الَّذِي أُنزِلَ مَعَهُ ۙ أُولَٰئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ ﴿١٥٧﴾

158. Waxaad dhahdaa dadow anugu waxaan ahay Rasuulkii Alle ee xaggiinna dhammaan, waana Allaha iska leh xukunka samooyinka iyo dhulka, Allaah mooyee macbuud kaloo xaq lugu caabudo ma jiro, isagaa wax nooleeya, waxna dila ee

قُلْ يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِنِّي رَسُولُ اللَّهِ إِلَيْكُمْ جَمِيعًا الَّذِي لَهُ مُلْكُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ ۖ لَا إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ يُحْيِي وَيُمِيتُ ۖ فَآمِنُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ النَّبِيِّ الْأُمِّيِّ الَّذِي يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَكَلِمَاتِهِ وَاتَّبِعُوهُ لَعَلَّكُمْ تَهْتَدُونَ ﴿١٥٨﴾

rumeeya Alle iyo Rasuulkiisa Nabiga ah ee ummiga ah ee rumeeyey Alle iyo kelmedihiisa, raacana, inaad hanuuntaan.

Aayadahani waxay ka hadli Nabi Muxamed (naxariis iyo nabagalyo Alle korkiisa ha yeelee) oo lagu tilmaamay: inuu wanaagga faro, xumaantana ka reebo, xalaashana u banneeyo xaaraantana ka reebo, dhibka iyo culayskana ka fududeeyo, oy naxariista Alle na mudan cidii raacda, oo rumaysa, qaddarisa, u gargaarta, oo raacda quraanka nuurka ah, inay liibaanto, waana Rasuul Alle u soo diray dadkoo dhan, oy waajib tahay in la raaco si loo hanuuno. Waana taas tilmaanta Nabiga, waxa dadka laga dooni inay falaan oo xaq ah ciddaan indho la'ayn. **[Al-Acraaf: 157-158].**

وَمِن قَوْمِ مُوسَىٰٓ أُمَّةٌ يَهْدُونَ بِٱلْحَقِّ وَبِهِۦ يَعْدِلُونَ ﴿١٥٩﴾

159. Waxaa ka mida qoomkii Nabi Muuse umad ku hanuunsanayd xaqa kuna caddaalad falaysay.

وَقَطَّعْنَٰهُمُ ٱثْنَتَىْ عَشْرَةَ أَسْبَاطًا أُمَمًا ۚ وَأَوْحَيْنَآ إِلَىٰ مُوسَىٰٓ إِذِ ٱسْتَسْقَىٰهُ قَوْمُهُۥٓ أَنِ ٱضْرِب بِّعَصَاكَ ٱلْحَجَرَ ۖ فَٱنۢبَجَسَتْ مِنْهُ ٱثْنَتَا عَشْرَةَ عَيْنًا ۖ قَدْ عَلِمَ كُلُّ أُنَاسٍ مَّشْرَبَهُمْ ۚ وَظَلَّلْنَا عَلَيْهِمُ ٱلْغَمَٰمَ وَأَنزَلْنَا عَلَيْهِمُ ٱلْمَنَّ وَٱلسَّلْوَىٰ ۖ كُلُوا۟ مِن طَيِّبَٰتِ مَا رَزَقْنَٰكُمْ ۚ وَمَا ظَلَمُونَا وَلَٰكِن كَانُوٓا۟ أَنفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ ﴿١٦٠﴾

160. Waxaana u kala gaynay laba iyo toban farac oo ummadood, waxaana u waxyoonnay Nabi Muuse markay waraab warsadeen qoomkiisii inuu ku garaaco ushiisa dhagaxa waxaana ka soo burqatay laba iyo toban ilood, cid kastana waxay ogaatay meeshey ka cabbi lahayd, waxaana ku hadhaynay daruuro, waxaana ku soo dejinnay manni (macaan) iyo cunno, waxaana ku nidhi ka cuna wanaaggaan idinku arzuqnay, mana ayan na dulmiyin waxayse dulmiyeen naftooda.

وَإِذْ قِيلَ لَهُمُ ٱسْكُنُوا۟ هَٰذِهِ ٱلْقَرْيَةَ
وَكُلُوا۟ مِنْهَا حَيْثُ شِئْتُمْ وَقُولُوا۟ حِطَّةٌ
وَٱدْخُلُوا۟ ٱلْبَابَ سُجَّدًا نَّغْفِرْ لَكُمْ
خَطِيٓـَٰتِكُمْ ۚ سَنَزِيدُ ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿١٦١﴾

161. Markii lagu yidhi dega magaaladaa kana cuna meeshaad doontaan dhehana Allow noo dambi dhaaf, kana gala albaabka idinkoo sujuudsan aan idiin dhaafno dambigiinnee, waannu u siyaadinaynaa samafalayaashee.

فَبَدَّلَ ٱلَّذِينَ ظَلَمُوا۟ مِنْهُمْ قَوْلًا غَيْرَ
ٱلَّذِى قِيلَ لَهُمْ فَأَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ رِجْزًا
مِّنَ ٱلسَّمَآءِ بِمَا كَانُوا۟ يَظْلِمُونَ ﴿١٦٢﴾

162. Waxayse ku badaleen kuwii dulmi falay oo ka mida hadal ka duwan kii loo yidhi (fala), waxaana ku dirray cadaab samada kaga yimid dulmiggoodii dartiis.

Alleheen wuxuu inoo sheegay inay qoomkii Nabi Muuse ka mid ahaayeen dad xaqa raacay oo ku socday, kana yeelay banii israa'iil qaybo midba meel ka cabto, Alle na ugu nicmeeyey nicmooyin badan sidaan soo sheegnay horay ayse dulmi faleen wanaaggiina xumaan ku badaleen, taasina waa caadadooda xun ee xaqa ka leexsan. Waxaase lagu abaal mariyey ciqaab daran, ay waajib tahay in laga digtoonaado isagoo kale. **[Al-Acraaf: 159-162].**

وَسْـَٔلْهُمْ عَنِ ٱلْقَرْيَةِ ٱلَّتِى كَانَتْ
حَاضِرَةَ ٱلْبَحْرِ إِذْ يَعْدُونَ فِى ٱلسَّبْتِ
إِذْ تَأْتِيهِمْ حِيتَانُهُمْ يَوْمَ سَبْتِهِمْ شُرَّعًا
وَيَوْمَ لَا يَسْبِتُونَ لَا تَأْتِيهِمْ ۚ كَذَٰلِكَ
نَبْلُوهُم بِمَا كَانُوا۟ يَفْسُقُونَ ﴿١٦٣﴾

163. Warso (yuhuud) magaaladii badda ku dhawayd (dadkeedii) markay xadgudbayeen sabtida, oo kalluunkoodu u imanayey maalinta sabtida ah isagoo muuqda, maalintaan sabti ahaynna uma timaaddo, saasaanna ugu imtixaannaa faasiqnimadooda darteed.

وَإِذْ قَالَتْ أُمَّةٌ مِّنْهُمْ لِمَ تَعِظُونَ قَوْمًا
ٱللَّهُ مُهْلِكُهُمْ أَوْ مُعَذِّبُهُمْ عَذَابًا
شَدِيدًا ۖ قَالُوا۟ مَعْذِرَةً إِلَىٰ رَبِّكُمْ وَلَعَلَّهُمْ
يَتَّقُونَ ﴿١٦٤﴾

164. Ka warran markay tidhi ummad ka mida maxaad u wacdiyeysaan qoom Alle halaagi ama u cadaabi si daran, waxayna dhaheen waa Alle u cudur daarasho, iyo inay dhawrsadaan inay u dhaw yihiin.

فَلَمَّا نَسُواْ مَا ذُكِّرُواْ بِهِۦٓ أَنجَيۡنَا ٱلَّذِينَ يَنۡهَوۡنَ عَنِ ٱلسُّوٓءِ وَأَخَذۡنَا ٱلَّذِينَ ظَلَمُواْ بِعَذَابِۭ بَـِٔيسِۭ بِمَا كَانُواْ يَفۡسُقُونَ ﴿١٦٥﴾

165. Markay halmaameen wixii lagu waaniyey waxaan korinnay kuwii xumaanta reebayey, waxaaana ku qabannay kuwii dulmiga falay cadaab xun, faasiqnimadooda darteed.

فَلَمَّا عَتَوۡاْ عَن مَّا نُهُواْ عَنۡهُ قُلۡنَا لَهُمۡ كُونُواْ قِرَدَةً خَٰسِـِٔينَ ﴿١٦٦﴾

166. Markay ku madax adaygeen wixii laga reebay yaan ku nidhi noqda daanyeer dullaysan.

Wuxuu Alle halkan kaga warramay yuhuuddii degganayd magaalo badda ku dhawayd oo lagu sheegay magaceeda Aayla, markii dadkeedii xadgudbeen oo kalluunka laga reebay maalinta sabtida ah ay ugaadhsadeen markuu u soo muuqdo sabtida, maalmaha kalana ka qarsoomo imtixaan dartiis, waxayna u qaybsameen saddex qeybood: koox ugaadhsatay, mid ka reebtay xumaanta, iyo mid iska aamustay, kuna yidhi kooxdii wax reebaysay maxaad u waaninaysaan dad Alle halaagi ama cadaabi, markaas ugu jawaabeen inaan waajib gudanno yaannu u fali, ama ay dhawrsadaan, markiise ay halmaameen waanadii yaa waxaa la koriyey kuwii xumaanta reebayey, waxaana cadaab lagu qabtay kuwii xumaanta falay, laguna yidhi daanyeer dullaysan noqda, taasi waxay ku tusin waajibnimada xumaan reebka iyo samo farka, waxaana la sheegay in yuhuuddu dabi jireen kalluunka maalinta sabtida ah, markuu ku dhacana ay la baxaan maalinta dambe, taasina waxay ku tusin khayaamada iyo xumaanta yuhuud. Tan kale waxaa laga aamusay kuwii aamusay, waxaana lays warsaday in la halaagay iyo in la nabadgaliyey, labadana waa la sheegay. **[Al-Acraaf: 163-166].**

وَإِذۡ تَأَذَّنَ رَبُّكَ لَيَبۡعَثَنَّ عَلَيۡهِمۡ إِلَىٰ يَوۡمِ ٱلۡقِيَٰمَةِ مَن يَسُومُهُمۡ سُوٓءَ ٱلۡعَذَابِۗ إِنَّ رَبَّكَ لَسَرِيعُ ٱلۡعِقَابِ وَإِنَّهُۥ لَغَفُورٞ رَّحِيمٞ ﴿١٦٧﴾

167. Xusuusta markuu Alle ogeysiiyey inuu u soo bixinayo yuhuud tan iyo qiyaamaha cid dhadhansiisa cadaab xun, Rabbigaana ciqaabtiisu way deg degtaa, waana dambi dhaafe naxariista.

وَقَطَّعۡنَٰهُمۡ فِي ٱلۡأَرۡضِ أُمَمٗاۖ مِّنۡهُمُ ٱلصَّٰلِحُونَ وَمِنۡهُمۡ دُونَ ذَٰلِكَۖ وَبَلَوۡنَٰهُم بِٱلۡحَسَنَٰتِ وَٱلسَّيِّـَٔاتِ لَعَلَّهُمۡ يَرۡجِعُونَ ﴿١٦٨﴾

168. Waxaanna ku kala gaynay dhulka iyagoo ummada ah, kuwo suubban iyo kuwo kalaba, waxaanna ku imtixaannay wanaag iyo dhibba inay noqdaan.

فَخَلَفَ مِنۢ بَعۡدِهِمۡ خَلۡفٞ وَرِثُواْ ٱلۡكِتَٰبَ يَأۡخُذُونَ عَرَضَ هَٰذَا ٱلۡأَدۡنَىٰ وَيَقُولُونَ سَيُغۡفَرُ لَنَا وَإِن يَأۡتِهِمۡ عَرَضٞ مِّثۡلُهُۥ يَأۡخُذُوهُۚ أَلَمۡ يُؤۡخَذۡ عَلَيۡهِم مِّيثَٰقُ ٱلۡكِتَٰبِ أَن لَّا يَقُولُواْ عَلَى ٱللَّهِ إِلَّا ٱلۡحَقَّ وَدَرَسُواْ مَا فِيهِۗ وَٱلدَّارُ ٱلۡأٓخِرَةُ خَيۡرٞ لِّلَّذِينَ يَتَّقُونَۚ أَفَلَا تَعۡقِلُونَ ١٦٩

169. Waxaana baddelay kuwo xun oo dhaxlay kitaabkii qaadanina muuqa adduunyadan dhaw, iyagoo dhihi waa naloo dhaafi hadduu u yimaaddo muuqaal la midana way qaataan, miyaan laga qaadin ballankii kitaabka inayan Alle waxaan xaq ahayn ku sheegin oyna akhriyin waxa dhaxdiisa ah, daarta aakhiro yaana u khayr roon kuwa dhawrsada ee miyeeydan wax kasayn.

وَٱلَّذِينَ يُمَسِّكُونَ بِٱلۡكِتَٰبِ وَأَقَامُواْ ٱلصَّلَوٰةَ إِنَّا لَا نُضِيعُ أَجۡرَ ٱلۡمُصۡلِحِينَ ١٧٠

170. Kuwa qabsada kitaabka oo ooga salaadda annagu ma dayacno ajriga kuwa wax suubbiya (samo fala).

Wuxuu Alle u yaboohay yuhuud in loo soo bixiyo tan iyo qiyaamada dad dhadhansiiya ciqaab daran, Alle na isagaa wax ciqaaba, naxariistana, waxaana lagu kala saydhay adduunka iyagoo kuwo roon iyo kuwo xunba lahaa, waana la imtixaamay bal inay waantoobaan, waxaase ka dambeeyey kuwaas kuwo adduunyada ka doortay aakhiro, inkastoo ballan laga qaaday waxaan run iyo xaq ahayn inayna Alle ku sheegin, oy kitaabkana bartaan. Illeen daarta aakhiro yaa u khayr roon ciddii dhawrsan oo wax kasiye, ciddiise qabsata kitaabka xaqa ah iyo xaqa dhabta ah oo salaadda oogta Alle ma dayaco ajriga sama falaha. Waxayna ku tusin wanaag ku dadaalka. **[Al-Acraaf: 167-170].**

* وَإِذۡ نَتَقۡنَا ٱلۡجَبَلَ فَوۡقَهُمۡ كَأَنَّهُۥ ظُلَّةٞ وَظَنُّوٓاْ أَنَّهُۥ وَاقِعُۢ بِهِمۡ خُذُواْ مَآ ءَاتَيۡنَٰكُم بِقُوَّةٖ وَٱذۡكُرُواْ مَا فِيهِ لَعَلَّكُمۡ تَتَّقُونَ ١٧١

171. (Ka warran) markaan ku koryeellay buurtii, sidii iyada oo hadhayn, una maleeyeen inay ku dhici, kuna nidhi ku qaata waxaan idin siinnay niyad adag, kuna waana qaata waxa ku sugan si aad u dhawrsataan.

وَإِذۡ أَخَذَ رَبُّكَ مِنۢ بَنِيٓ ءَادَمَ مِن ظُهُورِهِمۡ ذُرِّيَّتَهُمۡ وَأَشۡهَدَهُمۡ

172. (Xusuuso) markuu Allehaa ka qabtay dadka dhabarkooda faracoodii uuna marag uga

عَلَىٰٓ أَنفُسِهِمْ أَلَسْتُ بِرَبِّكُمْۖ قَالُواْ بَلَىٰ شَهِدْنَآۚ أَن تَقُولُواْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ إِنَّا كُنَّا عَنْ هَٰذَا غَٰفِلِينَ ﴿١٧٢﴾

yeelay naftooda, kuna yidhi miyaanan Allihiin ahayn, oy dhaheenna inaad Rabbigeen (cibaadada mudan) tahay yaan marag kacnay, inaydaan dhihin maalinta qiyaame annagu waan halmaansanayn kan.

أَوْ تَقُولُوٓاْ إِنَّمَآ أَشْرَكَ ءَابَآؤُنَا مِن قَبْلُ وَكُنَّا ذُرِّيَّةً مِّنۢ بَعْدِهِمْۖ أَفَتُهْلِكُنَا بِمَا فَعَلَ ٱلْمُبْطِلُونَ ﴿١٧٣﴾

173. Ama aydaan dhihin waxaa wax la wadaajiyey (Alle) aabbayaalkannagii mar hore, annaguna waxaan nahay farac ka dambeeyey, ee miyaad noo halaagi waxay faleen xumo falayaal.

وَكَذَٰلِكَ نُفَصِّلُ ٱلْءَايَٰتِ وَلَعَلَّهُمْ يَرْجِعُونَ ﴿١٧٤﴾

174. Saasaannu u caddaynaa aayaadka iyo inay u noqdaan xaqa.

Alle wuxuu ku amray banii israa'iil inay niyad adag ku qaataan kitaabkii Tawreed, wuxuuna korkooda yeelay buur hadhaysay, haddayna aqbalinna lagu dabooli, waxaa kale oo la faray inay ku socdaan tawreed si ay u dhawrsadaan, aayadaha kalana waxay ka warrami in Alle banii Aadamka naftooda marag uga yeelay, warsadayna inuu Rabbigood yahay iyo in kale, oyna marag kaceen ilaahnimada Alle, si ayna u dhihin maalinta qiyaame waxaan halmaansanayn oo jaahil ka ahayn arrintan, ama ayan u dhihin waxaa Alle la wadaajiyey aabbayaalkanno, aanaguse waxaan nahay farac dambeeyey ee ma waxaa naloo halaagi waxay dad xun faleen, saasuuna Alle ugu caddeeyey aayaadka inay xaqa u noqdaan. Taasina waxay muujin inaan dadka cudur daar u hadhin iyo waxay ku calaacalaan. Waxaana la wariyey in Alle kulmiyey arwaaxda dadka ballanna ka qaaday inay rumeeyaan xaqa, Alle na u hoggaansamaan. Waxaana habboon Alle ka yaabid, toosnaan iyo wanaag jacayl. **[Al-Acraaf: 171-174].**

وَٱتْلُ عَلَيْهِمْ نَبَأَ ٱلَّذِىٓ ءَاتَيْنَٰهُ ءَايَٰتِنَا فَٱنسَلَخَ مِنْهَا فَأَتْبَعَهُ ٱلشَّيْطَٰنُ فَكَانَ مِنَ ٱلْغَاوِينَ ﴿١٧٥﴾

175. Ku akhri korkooda kii warkiisii aan siinnay aayaadkannaga oo ka siibtay, shaydaanna uu raacay (isaga), kana mid noqday kuwa baadida ah.

176. Haddaan doonno waannu ku koryeeli lahayn, hasa yeeshee wuxuu u iishay dhulka (adduunyo jacayl) wuxuuna raacay hawadiisa, wuxuuna la mid yahay eey haddaad erido wuu lalmin carrabka, haddaad deysana wuu lalmin, saasna waa masalka qoomka beeniyey aayaadkannaga ee uga warran qisooyin inay waantoomaan.

وَلَوْ شِئْنَا لَرَفَعْنَٰهُ بِهَا وَلَٰكِنَّهُۥٓ أَخْلَدَ إِلَى ٱلْأَرْضِ وَٱتَّبَعَ هَوَىٰهُ ۖ فَمَثَلُهُۥ كَمَثَلِ ٱلْكَلْبِ إِن تَحْمِلْ عَلَيْهِ يَلْهَث أَوْ تَتْرُكْهُ يَلْهَث ۚ ذَّٰلِكَ مَثَلُ ٱلْقَوْمِ ٱلَّذِينَ كَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا ۚ فَٱقْصُصِ ٱلْقَصَصَ لَعَلَّهُمْ يَتَفَكَّرُونَ ﴿١٧٦﴾

177. Waxaa tusaale u xun qoomkii beeniyey aayaadkannaga, naftoodana waxay ahaayeen kuwo dulmiya.

سَآءَ مَثَلًا ٱلْقَوْمُ ٱلَّذِينَ كَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا وَأَنفُسَهُمْ كَانُوا۟ يَظْلِمُونَ ﴿١٧٧﴾

178. Ciddii Alle hanuuniyo umbaa hanuuni, cidduu dhumiyana waa uun kuwa khasaaray.

مَن يَهْدِ ٱللَّهُ فَهُوَ ٱلْمُهْتَدِى ۖ وَمَن يُضْلِلْ فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْخَٰسِرُونَ ﴿١٧٨﴾

Say dooni ha ahaatee waxay ka warrami aayadahani cid cilmi la baray oo adduunyo ka doortay, xaqana ka leexday, noqdayna baadi, oyna ku habboonayd inuu ku hanuuno, wuxuuse jeclaaday adduunyada, wuxuuna raacay hawadiisa xun, wuxuuna la mid yahay eey had iyo jeer carrabka lalmin, waana sidaas ciddii beenisa xaqa iyo aayaadka Alle, ayna habboon tahay in dadka looga warramo inay waantoomaan, tusaale iyo dadna iyagaa u xun, illeen waxay beeniyeen aayaadka Alle, waxayna dulmiyeen naftooda, ciddii Alle hanuuniyo yaa hanuuni, tuu dhumiyana wuu dhumi, taasina waxay ku tusin xumaanta cid Alle cilmi baray oon ku socon, xaqana raacin, adduunyana u xishay, cidday dooni ha noqotee, ama banii Israa'iil ama carabtii ama cid kasta, Alle na wuxuu uun dadka ka dooni: wanaag, xaq raac, iyo toosnaan dhab ah. **[Al-Acraaf: 175-178].**

179. Waxaan u abuurray jahannamo wax badan oo jinni iyo insiba leh, waxayna leeyihiin quluub ayna wax ku kasayn, waxayna leeyihiin indho ayna wax ku arkayn, waxayna leeyihiin

وَلَقَدْ ذَرَأْنَا لِجَهَنَّمَ كَثِيرًا مِّنَ ٱلْجِنِّ وَٱلْإِنسِ ۖ لَهُمْ قُلُوبٌ لَّا يَفْقَهُونَ بِهَا وَلَهُمْ أَعْيُنٌ لَّا يُبْصِرُونَ بِهَا وَلَهُمْ ءَاذَانٌ لَّا يَسْمَعُونَ بِهَآ ۚ

dhago ayna wax ku maqlayn, kuwasina waa xoolo oo kale, waana ka sii dhunsan yihiin, kuwaasina waa uun kuwa halmaansan.

أُوْلَٰٓئِكَ كَٱلْأَنْعَٰمِ بَلْ هُمْ أَضَلُّ ۚ أُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْغَٰفِلُونَ ﴿١٧٩﴾

180. Alle waxaa u sugnaaday magacyo wanaag badan, ee ku barya, iskagana taga kuwa leexin magacyadiisa, waxaa laga abaal marin waxay camal falayeen.

وَلِلَّهِ ٱلْأَسْمَآءُ ٱلْحُسْنَىٰ فَٱدْعُوهُ بِهَا ۖ وَذَرُوا۟ ٱلَّذِينَ يُلْحِدُونَ فِىٓ أَسْمَٰٓئِهِۦ ۚ سَيُجْزَوْنَ مَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿١٨٠﴾

181. Waxaa ka mida waxaan abuurray ummad ku hanuunsan xaqa, kuna socon.

وَمِمَّنْ خَلَقْنَآ أُمَّةٌ يَهْدُونَ بِٱلْحَقِّ وَبِهِۦ يَعْدِلُونَ ﴿١٨١﴾

Alle isagaa abuuray jahannamo (Alle Ayaan ka magan galnaye), wuxuuna u ballanqaaday inuu jinni iyo insi ka buuxiyaa, maxaa yeelay wax ma kasayaan, xubnaha Alle siiyey ee ah: qalbiga, lndho iyo dhago toona kuma lntifaacayaan, waana xoolo oo kale iyo ka sii daran, waana kuwo halmaamay xaqa, tan kale ilaaheenna wayn wuxuu leeyahay magacyo wanaag badan oyna habboon tahay in lagu baryo, lagana fogaado kuwa leexin magaca Alle oo ka yeeli wuxuusan raalli ka ahayn, oo ah beenin, leexin, si xun u fasirid iyo wax kastoo wax u dhimi, waana la abaal marin kuwaas. Waxaase jirtay dad hanuunsan oo xaqa ku socda, siduu Rasuulku yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): lama waayo koox ummaddayda ah oo xaqa ku taagan oo muuqda wax dhibi karana uusan jirin inta qiyaamadu ka timaaddo. Waxaa wariyey Bukhaari. **[Al-Acraaf: 179-181].**

182. Kuwa beeniyey aayaadkannaga waxaannu ka qaban meel ayna ogayn.

وَٱلَّذِينَ كَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا سَنَسْتَدْرِجُهُم مِّنْ حَيْثُ لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٨٢﴾

183. Waana u sugi, makrigaygu aad buu u daran yahay.

وَأُمْلِى لَهُمْ ۚ إِنَّ كَيْدِى مَتِينٌ ﴿١٨٣﴾

184. Miyeyna fikirin inaan saaxiibkooda (Nabiga) waalli hayn, waxaan dige cad ahaynna uuna ahayn.

أَوَلَمْ يَتَفَكَّرُوا۟ ۗ مَا بِصَاحِبِهِم مِّن جِنَّةٍ ۚ إِنْ هُوَ إِلَّا نَذِيرٌ مُّبِينٌ ﴿١٨٤﴾

أَوَلَمْ يَنظُرُواْ فِي مَلَكُوتِ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَمَا خَلَقَ ٱللَّهُ مِن شَيْءٍ وَأَنْ عَسَىٰٓ أَن يَكُونَ قَدِ ٱقْتَرَبَ أَجَلُهُمْۖ فَبِأَيِّ حَدِيثٍۭ بَعْدَهُۥ يُؤْمِنُونَ ﴿١٨٥﴾

185. Miyeyna dayin xukunka samooyinka iyo dhulka, iyo waxa Alle abuuray oo wax ah, iyo inay mudan tahay inay dhawdahay ajashoodu, hadalkayse quraanka ka dib rumayn.

مَن يُضْلِلِ ٱللَّهُ فَلَا هَادِيَ لَهُۥۚ وَيَذَرُهُمْ فِي طُغْيَٰنِهِمْ يَعْمَهُونَ ﴿١٨٦﴾

186. Cidduu dhumiyo Alle wax hanuunin ma leh. Wuxuuna kaga tegi xad gudubkooda iyagoo ku wareersan.

يَسْـَٔلُونَكَ عَنِ ٱلسَّاعَةِ أَيَّانَ مُرْسَىٰهَاۖ قُلْ إِنَّمَا عِلْمُهَا عِندَ رَبِّيۖ لَا يُجَلِّيهَا لِوَقْتِهَآ إِلَّا هُوَۚ ثَقُلَتْ فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِۚ لَا تَأْتِيكُمْ إِلَّا بَغْتَةًۗ يَسْـَٔلُونَكَ كَأَنَّكَ حَفِيٌّ عَنْهَاۖ قُلْ إِنَّمَا عِلْمُهَا عِندَ ٱللَّهِ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٨٧﴾

187. Waxay ku warsan saacadda (qiyaame) markay sugnaan, waxaad dhahdaa ogaanshaheedu waa Rabbigay agtiisa, waqtigeeda wax muujin kara oon Alle ahayn ma jiro, waxay ku cuslaatay samooyinka iyo dhulka, waxaan kado ahaynna idiinkuma timaaddo, waxay ku warsan saacadda sidii adoo og, waxaad dhahdaa ogaanshaheedu waa uun Alle agtiisa dadka badankiisuse ma oga (xaalkaas).

Xaq beeniye Alle ayaa siduu doono u ciqaabi, in xoolo iyo nolol lagu imtixaamana waa dhici kartaa, Alle na wuu sugi markuuse qabto ciqaabtiisu way daran tahay, waana inay gaaladu fikirto inaan Nabigu waallayn, ee dige cad uun yahay, hase eegeen mulkiga iyo xukunka Alle samooyinka iyo dhulka, waxa Alle abuuray, waxaana laga yaabaa inay ajashoodu dhawdahay, maxayse rumayn quraanka ka dib. Cidduu Alle dhumiyo wax hanuunin ma leh, waxayna ku wareeri xumaanta.

Saacadda qiyaamana cidaan Alle ahayn ma oga wayna ku cuslaatay cirka iyo dhulka, waxayna ku imaan kado, hase la rumeeyo, oo loo darbado. Xadiithna waxaa ku sugnaaday in qiyaamadu dhici iyadoo dad wax kala gadan, ama cidi maali xoolaheeda, ama dhoobi darkeeda oo malaasi, ama cunnadii kor u qaaday (Alle ha naga fududeeyo dhibkeeda isagaa awood leh). **[Al-Acraaf: 182-187].**

188. Waxaad dhahdaa uma hanto naftayda nacfi iyo dhib midna, wuxuu Alle doono mooyee, haddaan ahay mid og waxa maqan waxaan badsan lahaa khayrka imana taabteen xumaani, anigu waxaan uun ahay u dige una bishaareeye qoomkii rumayn (xaqa).

قُل لَّآ أَمۡلِكُ لِنَفۡسِي نَفۡعٗا وَلَا ضَرًّا إِلَّا مَا شَآءَ ٱللَّهُۚ وَلَوۡ كُنتُ أَعۡلَمُ ٱلۡغَيۡبَ لَٱسۡتَكۡثَرۡتُ مِنَ ٱلۡخَيۡرِ وَمَا مَسَّنِيَ ٱلسُّوٓءُۚ إِنۡ أَنَا۠ إِلَّا نَذِيرٞ وَبَشِيرٞ لِّقَوۡمٖ يُؤۡمِنُونَ ١٨٨

189. Alle waa kan idinka abuuray naf kaliya, kana yeelay xaggeeda haweenaydiisii inuu weheshado markay kulmeenna waxay qaadday uur fudud, saasayna ahayd, markay cuslaatayna waxay baryeen Allahooda Rabbigood ah: haddaad na siiso (ilmo) suubban waxaan noqonaynaa kuwa shugriya.

۞ هُوَ ٱلَّذِي خَلَقَكُم مِّن نَّفۡسٖ وَٰحِدَةٖ وَجَعَلَ مِنۡهَا زَوۡجَهَا لِيَسۡكُنَ إِلَيۡهَاۖ فَلَمَّا تَغَشَّىٰهَا حَمَلَتۡ حَمۡلًا خَفِيفٗا فَمَرَّتۡ بِهِۦۖ فَلَمَّآ أَثۡقَلَت دَّعَوَا ٱللَّهَ رَبَّهُمَا لَئِنۡ ءَاتَيۡتَنَا صَٰلِحٗا لَّنَكُونَنَّ مِنَ ٱلشَّٰكِرِينَ ١٨٩

190. Markuu siiyey mid suubban waxay u yeeleen wax la wadaaga wuxuu Alle siiyey, Alle ayaa ka sarreeya waxay la wadaajiyeen.

فَلَمَّآ ءَاتَىٰهُمَا صَٰلِحٗا جَعَلَا لَهُۥ شُرَكَآءَ فِيمَآ ءَاتَىٰهُمَاۚ فَتَعَٰلَى ٱللَّهُ عَمَّا يُشۡرِكُونَ ١٩٠

Awoodda Alle ayaa iska leh, cid nacfi iyo dhib hananna ma jirto, illeen Alle ayaa faray Nabigiisa (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu dadka u caddeeyo xaalkaas, hadduu og yahay waxa maqanna wuxuu badsan lahaa khayrka dhibna uusan taabteen, waana uun u dige u bishaareeye, ciddii xaqa rumayn. Alle na dadka wuxuu ka abuuray naf kaliya Aadam, kana ahaysiiyey haweenaydiisii si ay isugu xasilaan isuna weheshadaan, markay kulmeenna ay uuraysatay ayna Alle warsadeen inuu ilmo suuban siiyo, markaasay dadku Alle wax la wadaajiyaan arrimihiisa, intay ku mahdin lahaayeen, Alle na waa ka sarreeyaa wax lala wadaajiyo. Waxaana la sheegay in kuwo Alle wax la wadaajiyey ay ahaayeen dad kale oon ahayn Aadam iyo Xaawo. **[Al-Acraaf: 188-190].**

أَيُشْرِكُونَ مَا لَا يَخْلُقُ شَيْـًٔا وَهُمْ يُخْلَقُونَ ﴿١٩١﴾

191. Ma waxay la wadaajin waxaan wax abuurin, iyagana la abuuro.

وَلَا يَسْتَطِيعُونَ لَهُمْ نَصْرًا وَلَآ أَنفُسَهُمْ يَنصُرُونَ ﴿١٩٢﴾

192. Oon karaynna gargaar, naftoodana aan u gargaarayn.

وَإِن تَدْعُوهُمْ إِلَى ٱلْهُدَىٰ لَا يَتَّبِعُوكُمْ ۚ سَوَآءٌ عَلَيْكُمْ أَدَعَوْتُمُوهُمْ أَمْ أَنتُمْ صَٰمِتُونَ ﴿١٩٣﴾

193. Haddaad ugu yeedho hanuunkana idinma raacaan, waana isku mid haddaad u yeedhaan iyo haddaad ka aamustaanba.

إِنَّ ٱلَّذِينَ تَدْعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ عِبَادٌ أَمْثَالُكُمْ ۖ فَٱدْعُوهُمْ فَلْيَسْتَجِيبُوا۟ لَكُمْ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿١٩٤﴾

194. Kuwaad caabudaysaan (u yeedheysaan) Alle ka sokow waa addoommo idinkoo kala ah, bal u yeedha oo haydin yeeleen (aqbaleen) haddaad run sheegaysaan.

أَلَهُمْ أَرْجُلٌ يَمْشُونَ بِهَآ ۖ أَمْ لَهُمْ أَيْدٍ يَبْطِشُونَ بِهَآ ۖ أَمْ لَهُمْ أَعْيُنٌ يُبْصِرُونَ بِهَآ ۖ أَمْ لَهُمْ ءَاذَانٌ يَسْمَعُونَ بِهَا ۗ قُلِ ٱدْعُوا۟ شُرَكَآءَكُمْ ثُمَّ كِيدُونِ فَلَا تُنظِرُونِ ﴿١٩٥﴾

195. Ma waxay leeyihiin lugo ay ku socdaan, mise waxay leeyihiin gacmo ay wax ku qabtaan, mise waxay leeyihiin indho ay wax ku arkaan, mise waxay leeyihiin dhago ay wax ku maqlaan, waxaad dhahdaa u yeedha shurakadiinna ina dhagra hana i sugina.

إِنَّ وَلِيِّىَ ٱللَّهُ ٱلَّذِى نَزَّلَ ٱلْكِتَٰبَ ۖ وَهُوَ يَتَوَلَّى ٱلصَّٰلِحِينَ ﴿١٩٦﴾

196. Waligaygu waa Ilaaha soo dejiyey kitaabka isagaana u gargaara kuwa suubban.

Siday Alle ula caabudi waxaan wax abuurayn oo la abuuri iyaga, karaynna inay u gargaaraan ama naftooda u gargaarayn, haddaad wax toosin ugu yeedhana kuma raacaan, waana isku mid haddaad u yeedhaan ama ka aamustaan, waana addoommo idinkoo kale ah, mana ajiibaan hadday u yeedhaan, lugo

ma leeyihiin ay ku socdaan, ama gacmo ay wax ku qabtaan, ama indho ay wax ku arkaan, ama dhago ay wax ku maqlaan, ha soo kulmiyaan shurakadooda hana dhagreen waxna yeyna sugin, gargaaraha Nabiga ee kuwa suubban dhaqaaleeya waa Allaha soo dejiyey kitaabka quraanka ah, mana habboona, mana bannaana in la caabudo waxaan Alle ahayn, waxna laga rajeeyo, illeen Alle umbaa awood buuxda lehe. **[Al-Acraaf: 191-196].**

197. Waxaad caabudaysaan Alle ka sokow ma karaan gargaarkiinna, naftoodana uma gargaarayaan.

وَٱلَّذِينَ تَدۡعُونَ مِن دُونِهِۦ لَا يَسۡتَطِيعُونَ نَصۡرَكُمۡ وَلَآ أَنفُسَهُمۡ يَنصُرُونَ ﴿١٩٧﴾

198. Hadday ugu yeedhaan hanuunkana ma maqlaan waxaadna aragtaa iyagoo ku soo eegi oon waxba arkayn.

وَإِن تَدۡعُوهُمۡ إِلَى ٱلۡهُدَىٰ لَا يَسۡمَعُواْۖ وَتَرَىٰهُمۡ يَنظُرُونَ إِلَيۡكَ وَهُمۡ لَا يُبۡصِرُونَ ﴿١٩٨﴾

199. Qaado waxa fudud (ee akhlaaqda dadka ah) farna wanaagga kana jeedso jaahiliinta.

خُذِ ٱلۡعَفۡوَ وَأۡمُرۡ بِٱلۡعُرۡفِ وَأَعۡرِضۡ عَنِ ٱلۡجَٰهِلِينَ ﴿١٩٩﴾

200. Hadduu ku waswaasiyo shaydaan xaggiis waswaasiye ka magangal Alle isagaa maqle oge ahe.

وَإِمَّا يَنزَغَنَّكَ مِنَ ٱلشَّيۡطَٰنِ نَزۡغٞ فَٱسۡتَعِذۡ بِٱللَّهِۚ إِنَّهُۥ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٢٠٠﴾

201. Kuwa dhawrsaday hadduu taabto shar shaydaan way xusuustaan (waantoomaan) wayna arkaan xaqa (toosnaadaan).

إِنَّ ٱلَّذِينَ ٱتَّقَواْ إِذَا مَسَّهُمۡ طَٰٓئِفٞ مِّنَ ٱلشَّيۡطَٰنِ تَذَكَّرُواْ فَإِذَا هُم مُّبۡصِرُونَ ﴿٢٠١﴾

202. Walaalaha shaydaankuse waxay ugu kaalmeeyaan baadida kamana daalaan.

وَإِخۡوَٰنُهُمۡ يَمُدُّونَهُمۡ فِي ٱلۡغَيِّ ثُمَّ لَا يُقۡصِرُونَ ﴿٢٠٢﴾

Waxa Alle ka soo hadhay oo la caabudo waa waxaan waxba karayn, gargaari karinna, naftoodana u gargaari karin, kumana maqlaan, kumana arkaan. Wuxuuna Alle fari dabeecad wanaagga iyo wanaagga oo la faro, jaahiliintana

laga jeedsado, hadduu shaydaan waswaasiyo ruuxana waa inuu Alle ka magan galaa illeen Alle ayaa waxna maqla waxna oge. Maxaa yeelay waxaa ka mida xaalka kuwa dhawrsada in marka shaydaan xumaan ku taabto ay xusuustaan Alle waantoomaanna, kuwa gaaloobayse waxaa sii dhumiya shaydaan illeen walaalay ka yeesheene. Aayadahanna waxay fari dadka wanaag, ugana digi xumaanta, lagana digtoonaado shaydaanka, gaalada, jaahiliinta.

Waxaana xadiith ah: xidhiidhi ciddii ku goysa, siina ciddii kuu diida, kana jeedso ciddii ku dulmida. Musnad Axmed. Saas darteed waa in Alle uun la caabudo, wanaagna laga rajeeyo, shaydaan iyo colkiisna laga digtoonaado. **[Al-Acraaf: 197-202].**

وَإِذَا لَمۡ تَأۡتِهِم بِـَٔايَةٖ قَالُواْ لَوۡلَا ٱجۡتَبَيۡتَهَاۚ قُلۡ إِنَّمَآ أَتَّبِعُ مَا يُوحَىٰٓ إِلَيَّ مِن رَّبِّيۚ هَٰذَا بَصَآئِرُ مِن رَّبِّكُمۡ وَهُدٗى وَرَحۡمَةٞ لِّقَوۡمٖ يُؤۡمِنُونَ ٢٠٣

203. Haddaadan ula imaannin aayad waxay dhahaan: maxaad u soo dooran wayday, waxaad dhahdaa waxaan uun raaci wixii layga waxyooday xagga Rabbigay, kaasina waa xujooyin xagga Allihiin ka ahaatay iyo hanuunka iyo naxariista ciddii rumayn (xaqa).

وَإِذَا قُرِئَ ٱلۡقُرۡءَانُ فَٱسۡتَمِعُواْ لَهُۥ وَأَنصِتُواْ لَعَلَّكُمۡ تُرۡحَمُونَ ٢٠٤

204. Markii la akhriyo quraanka dhagaysta una dhag raariciya, in laydiin naxariisto.

وَٱذۡكُر رَّبَّكَ فِي نَفۡسِكَ تَضَرُّعٗا وَخِيفَةٗ وَدُونَ ٱلۡجَهۡرِ مِنَ ٱلۡقَوۡلِ بِٱلۡغُدُوِّ وَٱلۡأٓصَالِ وَلَا تَكُن مِّنَ ٱلۡغَٰفِلِينَ ٢٠٥

205. Ku xus Allehaa naftaada khushuuc (baryo) iyo cabsi, iyo qaylo la'aan hadal, aroor iyo galabba, hana noqon kuwa halmaama (xuska Alle).

إِنَّ ٱلَّذِينَ عِندَ رَبِّكَ لَا يَسۡتَكۡبِرُونَ عَنۡ عِبَادَتِهِۦ وَيُسَبِّحُونَهُۥ وَلَهُۥ يَسۡجُدُونَ ۩ ٢٠٦

206. Kuwa Alle agtiisa ah iskama kibriyaan cibaadadiisa wayna u tasbiixsadaan (nasahaan), isagayna u sujuudaan.

Gaaladu waxay warsadeen Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu la yimaaddo mucjisooyin jeebkiisa ah, wuxuuse raacaa wixii Alle u waxyooday oo xaq ah, waxna lagu kala garto, hanuun iyo naxariisna u ah ciddii xaqa rumayn, xaquna waa u cad yahay ciddii raaci, oo markuu maqlo

quraankoo la akhrin dhagaysta una dhag raariciya, si loogu naxariisto. Waana in Alle si hoos iyo khushuuca loo xuso oon qaylo lahayn, waqti kasta iyo subax iyo galabba, lana halmaamin. Malaa'igta Alle ag joogtana iskama wayneeyaan cibaadadiisa, wayna nasahaan oo u tasbiixsadaan wayna u sujuudaan. Sidaas darteed waa in xaqa la raaco, quraankana la akhriyo, Alle loo xuso hoos subax iyo galabba, lana halmaamin, illeen malaa'igtaa caabudi, isna kibrinayn, una sujuudiye. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: dadow u dhimriya naftiinna illeen uma yeedhaysaan mid dhaga la' ama maqane, Ilaahaad u yeedhaysaan waa wax maqle, dhawe, idiinkana dhaw cunaha gaadiidkiinna.

Waxayna ahayd mar dadku kor u qaadeen takbiirta, marka ay buur fuulaan ama ka degtaan. **[Al-Acraaf: 203-206].**

Suurat Al-Anfaal

سُورَةُ الأَنفَالِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

يَسْـَٔلُونَكَ عَنِ ٱلْأَنفَالِ ۖ قُلِ ٱلْأَنفَالُ لِلَّهِ وَٱلرَّسُولِ ۖ فَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَأَصْلِحُوا۟ ذَاتَ بَيْنِكُمْ ۖ وَأَطِيعُوا۟ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥٓ إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ﴿١﴾

1. Waxay ku warsan dadku (xukunka) qaniimada, waxaad dhahdaa qaniimada waxaa iska leh Alle iyo Rasuulka ee ka dhawrsada Alle, wanaajiyana xaalka dhexdiinna ah, Alle na adeeca iyo Rasuulkiisa haddaad kuwo rumeeyey tihiin.

إِنَّمَا ٱلْمُؤْمِنُونَ ٱلَّذِينَ إِذَا ذُكِرَ ٱللَّهُ وَجِلَتْ قُلُوبُهُمْ وَإِذَا تُلِيَتْ عَلَيْهِمْ ءَايَٰتُهُۥ زَادَتْهُمْ إِيمَٰنًا وَعَلَىٰ رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ ﴿٢﴾

2. Mu'miniinta dhabta ah waa uun kuwa marka Alle la xuso ay cabsato quluubtoodu, marka lagu akhriyo korkooda aayaadka Allana ay iimaan u kordhiso, Rabbigood uunna tala saarta.

ٱلَّذِينَ يُقِيمُونَ ٱلصَّلَوٰةَ وَمِمَّا رَزَقْنَٰهُمْ يُنفِقُونَ ﴿٣﴾

3. Ee ah kuwa ooga salaadda, waxaannu ku arzaaqnayna wax ka bixiya.

أُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْمُؤْمِنُونَ حَقًّا ۚ لَّهُمْ دَرَجَٰتٌ عِندَ رَبِّهِمْ وَمَغْفِرَةٌ وَرِزْقٌ كَرِيمٌ ﴿٤﴾

4. Kuwaasaana ah mu'miniinta xaqa ah, waxayna mudan jannooyin Rabbigood agtiisa ah, iyo dambi dhaaf iyo rizqi sharaf leh.

Dagaalkii waynaa ee badar ee dhexmaray muslimiinta iyo gaaladii yey ku soo degtay aayaddu, markay qaar muslimiintii ka mida ku hadleen qaniimadii, waxaana tawallin Alle oo loo iili xaqa iyo Rasuulka (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) oo ku bixin una qaybin xaqa, mase habboona in lagu

murmo, waase in muslimiintu Alle ka dhawrsadaan, hagaajiiyaanna xaalka dhexdooda ah, oyna adeecaan Alle iyo Rasuulkiisa hadday mu'miniin dhaba yihiin. Aayadaha kale waxay tilmaami mu'miniinta dhabta ah, wanaagga kuwa kulansaday, marka Alle la xuso qalbigoodaa argagaxa oo cabsada, marka quraanka lagu akhriyana iimaan u kordho, Alle uun tala saarta, salaadda ooga, waxna bixiya, kuwaasaana ah mu'miniinta xaqa ah ee dhabta ah, mudanna darajooyin Alle agtiisa, dambi dhaaf iyo rizqi sharaf leh. **[Al-Anfaal: 1-4].**

كَمَآ أَخۡرَجَكَ رَبُّكَ مِنۢ بَيۡتِكَ بِٱلۡحَقِّ وَإِنَّ فَرِيقٗا مِّنَ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ لَكَٰرِهُونَ ٥

5. Siduu kaaga bixiyey Allehaa gurigaaga si xaq ah (jahaad) koox mu'miniinta ka mida way nacayeen.

يُجَٰدِلُونَكَ فِي ٱلۡحَقِّ بَعۡدَمَا تَبَيَّنَ كَأَنَّمَا يُسَاقُونَ إِلَى ٱلۡمَوۡتِ وَهُمۡ يَنظُرُونَ ٦

6. Waxayna kugula murmi xaqa intuu u cadaaday ka dib sidii iyagoo loo wado geeri iyagoo eegi.

وَإِذۡ يَعِدُكُمُ ٱللَّهُ إِحۡدَى ٱلطَّآئِفَتَيۡنِ أَنَّهَا لَكُمۡ وَتَوَدُّونَ أَنَّ غَيۡرَ ذَاتِ ٱلشَّوۡكَةِ تَكُونُ لَكُمۡ وَيُرِيدُ ٱللَّهُ أَن يُحِقَّ ٱلۡحَقَّ بِكَلِمَٰتِهِۦ وَيَقۡطَعَ دَابِرَ ٱلۡكَٰفِرِينَ ٧

7. Xusuuso makuu idiin yaboohay Alle labadii kooxood midkood (colkii iyo safarkii) inay idiin sugnaatay, idinkoo jecel in midda tabarta yar idiin ahaato, Alle na wuxuu dooni inuu xaqa ku sugo kalimadiisa, gooyana cidhibta gaalada.

لِيُحِقَّ ٱلۡحَقَّ وَيُبۡطِلَ ٱلۡبَٰطِلَ وَلَوۡ كَرِهَ ٱلۡمُجۡرِمُونَ ٨

8. Si uu xaqa u sugo, una buriyo baadilka (xumaanta), haba naceen dambiilayaashuye.

Aayadahanna waxay ka warrami dagaalkii waynaa ee Badar iyo in dad ka mida muslimiintii ay nacayeen in loo baxo dagaalka, Alle se wuxuu u yaboohay Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) labada kooxood middood oo ah safarkuu Abuusufyaan hoggaaminayey ee Shaam ka yimid iyo colkii waynaa ee gaaladii makaad, inkastooy mu'miniintu jeclayd inay la kulmaan safarka, Rabbiga xigmadda lehse wuxuu doonay inuu xaqa sugo, xumaanta iyo baadilkana buriyo oo jabiyo, gaaladana gummaado, saasaana dhacday maalintaas oo gaaladii kibirsanayd ee badnaa waxaa jabiyey mu'miniin yar, gargaarka Alle na waa mudan tahay ciddii xaqa si dhaba u raacda ee diinta Alle ku toosta. **[Al-Anfaal: 5-8].**

إِذْ تَسْتَغِيثُونَ رَبَّكُمْ فَٱسْتَجَابَ لَكُمْ أَنِّى مُمِدُّكُم بِأَلْفٍ مِّنَ ٱلْمَلَٰٓئِكَةِ مُرْدِفِينَ ﴿٩﴾

9. Xusuusta markaad ka gargaar warsanayseen Alle oo uu idinku ajiibay waxaan idinku xoojin kun malaa'igta ka mida oo israacraacsan.

وَمَا جَعَلَهُ ٱللَّهُ إِلَّا بُشْرَىٰ وَلِتَطْمَئِنَّ بِهِۦ قُلُوبُكُمْ ۚ وَمَا ٱلنَّصْرُ إِلَّا مِنْ عِندِ ٱللَّهِ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿١٠﴾

10. Wuxuu Alle u yeelay bishaaro iyo inuu xasilo qalbigiinnu, gargaarra waxaan Alle agtiisa ahayn ma aha, Alle na waa adkaade fal san.

إِذْ يُغَشِّيكُمُ ٱلنُّعَاسَ أَمَنَةً مِّنْهُ وَيُنَزِّلُ عَلَيْكُم مِّنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً لِّيُطَهِّرَكُم بِهِۦ وَيُذْهِبَ عَنكُمْ رِجْزَ ٱلشَّيْطَٰنِ وَلِيَرْبِطَ عَلَىٰ قُلُوبِكُمْ وَيُثَبِّتَ بِهِ ٱلْأَقْدَامَ ﴿١١﴾

11. Xusuustana markuu idinku daboolay hurdo aamminnimo darteed, idinkagana soo dejiyey samada biyo, inuu idinku daahiriyo idinkagana tegsiiyo waswaaska shaydaanka iyo inuu ku adkeeyo quluubtiinna kuna sugo gommadihiinna.

إِذْ يُوحِى رَبُّكَ إِلَى ٱلْمَلَٰٓئِكَةِ أَنِّى مَعَكُمْ فَثَبِّتُوا۟ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ۚ سَأُلْقِى فِى قُلُوبِ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ ٱلرُّعْبَ فَٱضْرِبُوا۟ فَوْقَ ٱلْأَعْنَاقِ وَٱضْرِبُوا۟ مِنْهُمْ كُلَّ بَنَانٍ ﴿١٢﴾

12. Markuu u waxyoon Allehaa malaa'igta anaa idinla jira ee suga kuwa xaqa rumeeyey (xoojiya) waxaan ku tuuri quluubta kuwa gaaloobay argagax ee ka garaaca luqunta korkeeda kana garaaca xubnaha faraha.

ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ شَآقُّوا۟ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ ۚ وَمَن يُشَاقِقِ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ فَإِنَّ ٱللَّهَ شَدِيدُ ٱلْعِقَابِ ﴿١٣﴾

13. Maxaa yeelay waxay khilaafeen Alle iyo Rasuulkiisa, ciddii khilaafta Alle iyo rasuulkiisana Alle waa u ciqaab daran yahay.

ذَٰلِكُمْ فَذُوقُوهُ وَأَنَّ لِلْكَٰفِرِينَ عَذَابَ ٱلنَّارِ ﴿١٤﴾

14. Ee arrintaas dhadhamiya, gaalana waxaa u sugnaaday cadaabka naarta.

Dagaalkii badar wuxuu ahaa arrin aad u wayn, Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) markuu dayey asaxaabta oo saddex boqol iyo dhawra iyo gaaladii oo kun ah yuu qaabilay qiblada baryeyna Alle isagoo dhihi: Ilaahoow ii fuli yaboohaagii, ilaahoow haddaad halaagto kooxdan islaamka ah lagugu caabudi maayo dhulka waligeed, intuu go'ii garabaha ka dhaco oo sayid abuubakar ka dhaho kugu filan, wuxuuna Alle ku xoojiyey malaa'ig si loogu bishaareeyo mu'mininta, quluubtoodana loo xasiliyo, gargaarna Alle ayaa haysta, waxaana qabatay muslimiinta hurdo inayan cabsan, roob daahiriyana wuu u soo daayey niyada u adkeeyey, lugahana u sugay, wuxuuna Alle faray malaa'igta inay sugaan mu'mininta illeen Alle ayaa la jiree, kuna tuuri niyadda gaalada argagax, iyo inay ka garaacaan madaxa iyo faraha illeen waxay khilaafeen Alle iyo Rasuulkiisii, ciddii khilaaftana waxay mudan ciqaab daran, gaalana waxaa u sugnaaday cadaabka naarta, saasuuna Alle ugu gargaaraa mu'mininta dhabta ah. **[Al-Anfaal: 9-14].**

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِذَا لَقِيتُمُ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ زَحۡفٗا فَلَا تُوَلُّوهُمُ ٱلۡأَدۡبَارَ ١٥

15. Kuwa xaqa rumeeyow hadaad la kulantaan kuwa gaaloobay idinkoo isu soo dhawaan ha u jeedinnina dabada (ha cararina).

وَمَن يُوَلِّهِمۡ يَوۡمَئِذٖ دُبُرَهُۥٓ إِلَّا مُتَحَرِّفٗا لِّقِتَالٍ أَوۡ مُتَحَيِّزًا إِلَىٰ فِئَةٖ فَقَدۡ بَآءَ بِغَضَبٖ مِّنَ ٱللَّهِ وَمَأۡوَىٰهُ جَهَنَّمُۖ وَبِئۡسَ ٱلۡمَصِيرُ ١٦

16. Ruuxii u jeediya maalintaas dabadiisa (carara) isagoon u xeelaysanayn dagaal ama ku biirayn koox, wuxuu la noqdaa cadho Alle, hooygiisuna waa jahannamo, iyadaana u xun meel loo ahaado.

فَلَمۡ تَقۡتُلُوهُمۡ وَلَٰكِنَّ ٱللَّهَ قَتَلَهُمۡۚ وَمَا رَمَيۡتَ إِذۡ رَمَيۡتَ وَلَٰكِنَّ ٱللَّهَ رَمَىٰ وَلِيُبۡلِيَ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ مِنۡهُ بَلَآءً حَسَنًاۚ إِنَّ ٱللَّهَ سَمِيعٌ عَلِيمٞ ١٧

17. Idinku maydaan ku layn gaalada (xooggiinna) Alle ayaase laayey, mana aadan ganayn markaad ganaysay Alle ayaase ganay (ku hagaajiyey) inuu u nicmeeyo mu'miniita nicmo wanaagsan, Alle na waa maqle og.

ذَٰلِكُمۡ وَأَنَّ ٱللَّهَ مُوهِنُ كَيۡدِ ٱلۡكَٰفِرِينَ ١٨

18. Arrinkaasi waa fal Alle, walibana Alla wuu tabar yarayn dhagarta gaalada.

Aayaduhu waxay caddayn inay ka reebboon tahay mu'mininta markay cadowgooda gaalada ah dagaal kula kumlaan inay cararaan oo dhabarka u jeediyann, ciddii carartana waxay mudan cadho Alle waxayna u hoyan naarta

jahannamo ee u xun meel loo ahaado. Marka laga reebo u xeelaysi dagaal ama ku biirid iyo u dunmid koox kale oo taageerta. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu ka mid yeelay ka cararka jahaadka toddobada dadka halaagta naartana galisa. Wuxuuna Alle ku mannadaystay Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) gargaarkii iyo guushii waynayd ee Badar iyo in Alle si dhaba ugu hagaajiyey uguna toosiyey tuuryadii gaalada intay ka jabaan oo laga laayo, illeen awoodda Alle ayaa lehe, mu'miniintana wuxuu ugu nicmeeyey nicmo wanaagsan, wuxuuna saas u falay inuu jilciyo oo tirtiro dhagarta gaalada, colka islaamka ah, taasina waxay ku tusin in jahaadku waajib adag yahay, ciddii muslima oo ka tagtana ay mudan dulli, addoonsi iyo tabar yari, markiise Alle lagu xidhnaado, diintana lagu toosnaado xaqana lagu jahaado waxaa la heli guul, sharaf, cisi, dambi dhaaf iyo jannadii Alle ee wanaagsanayd. **[Al-Anfaal: 15-18].**

إِن تَسْتَفْتِحُواْ فَقَدْ جَآءَكُمُ ٱلْفَتْحُ ۖ وَإِن تَنتَهُواْ فَهُوَ خَيْرٌ لَّكُمْ ۖ وَإِن تَعُودُواْ نَعُدْ وَلَن تُغْنِىَ عَنكُمْ فِئَتُكُمْ شَيْـًٔا وَلَوْ كَثُرَتْ وَأَنَّ ٱللَّهَ مَعَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٩﴾

19. Haddaad kala xukumid dalabteen gaalooy waxaa idiin yimid u gargaarkii (Nabiga) haddaadse reebtoontaan yaa idiin khayr roon, haddaad ku noqotaan xumaantana waxaannu ku noqon gargaarka (Nabiga) waxna idiinma tarayso kooxdiinnu haba badnadeene, Alle na wuxuu la jiraa mu'miniinta.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ أَطِيعُواْ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ وَلَا تَوَلَّوْاْ عَنْهُ وَأَنتُمْ تَسْمَعُونَ ﴿٢٠﴾

20. Kuwa (xaqa) rumeeyow adeeca Alle iyo Rasuulkiisa hana ka jeedsanina idinkoo maqli.

وَلَا تَكُونُواْ كَٱلَّذِينَ قَالُواْ سَمِعْنَا وَهُمْ لَا يَسْمَعُونَ ﴿٢١﴾

21. Hana noqonnina kuwii yidhi maqallay iyagoon wax maqlayn.

* إِنَّ شَرَّ ٱلدَّوَآبِّ عِندَ ٱللَّهِ ٱلصُّمُّ ٱلْبُكْمُ ٱلَّذِينَ لَا يَعْقِلُونَ ﴿٢٢﴾

22. Dhul socod waxaa ugu shar badan (u xun) Alle agtiisa ma maqle (xaqa) ma hadle oon kasayn (wanaagga).

وَلَوْ عَلِمَ ٱللَّهُ فِيهِمْ خَيْرًا لَّأَسْمَعَهُمْ ۖ وَلَوْ أَسْمَعَهُمْ لَتَوَلَّواْ وَّهُم مُّعْرِضُونَ ﴿٢٣﴾

23. Hadduu ku og yahay Alle khayr wuu maqashiin lahaa (garansiin lahaa) hadduuse maqashiiyo way

jeedsan lahaayeen (kibir dartiis) iyagoo jeedsanaya (jeedsasho aan soo noqosha lahayn).

24. Kuwa xaqa rumeeyow maqla Alle iyo Rasuulka markuu idiinku yeedho wax idin nooleeya (xaqa) ogaadana in Alle (karo) inuu kala dhexmaro ruuxa iyo qalbigiisa, oo xaggiisa laydiin soo kulmin.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱسْتَجِيبُواْ لِلَّهِ وَلِلرَّسُولِ إِذَا دَعَاكُمْ لِمَا يُحْيِيكُمْ ۖ وَٱعْلَمُوٓاْ أَنَّ ٱللَّهَ يَحُولُ بَيْنَ ٱلْمَرْءِ وَقَلْبِهِۦ وَأَنَّهُۥٓ إِلَيْهِ تُحْشَرُونَ ﴿٢٤﴾

Gaaladii carbeed waxay Alle warsan jireen isla wayni darteed in Alle halaago ciddii xumaan wadda iyaga iyo mu'miniinta, waxaana u yimid waxay warsanayeen maalintii badar, waana la halaagay, inay xumaanta ka joogaan yaana u khayr roon, hadday ku noqdaanna Alle wuxuu u gargaari mu'miniinta dhabta ah, waxaana laga rabaa mu'miniinta inay si run ah u adeecaan Alle iyo rasuulkiisa, xaqana raacaan, oyna la mid noqon kuwa dhaha waan maqalnay iyagoon maqlin, waxaana ugu liita Alle agtiisa waxa dhulka ku socda cid xaqa ka dhaga la', oo ka afla', oon garanaynoo markii xaqa loo sheego ka jeedsata, dadka mu'miniinta ahse waa inay maqlaan oo yeelaan Alle iyo Rasuulkiisa markuu wax nooleeya oo diinta islaamka ah iyo xaqa ugu yeedho, illeen waa nolole, waxa ka soo hadhayna waa geeriye, arrintana Alle ayaa haysta oo toosin cidduu doono oo wanaagga ku dadaasha, xaggiisaana laysu kulmin. Saas darteed ciddii nolol, wanaag, sharaf iyo khayr rabta ha raacdo quraanka iyo xaqa. **[Al-Anfaal: 19-24].**

25. Ka dhawrsada fidmo oon ugu dhacayn kuwii dulmiga falay gaar ahaan oo idinka mida, ogaadana in Alle ciqaabtiisu daran tahay.

وَٱتَّقُواْ فِتْنَةً لَّا تُصِيبَنَّ ٱلَّذِينَ ظَلَمُواْ مِنكُمْ خَآصَّةً ۖ وَٱعْلَمُوٓاْ أَنَّ ٱللَّهَ شَدِيدُ ٱلْعِقَابِ ﴿٢٥﴾

26. Xusuustana markaad ahaydeen kuwo yaroo lagu tabar darraysto dhulka (Makaad) idinkoo ka cabsan in dadku idin dafo oo markaas uu idin dhaweeyay (dumay) idinkuna xoojiyey gargaarkiisa, idinkuna arzaaqay wanaag (xalaal) inaad ku mahdisaan.

وَٱذْكُرُوٓاْ إِذْ أَنتُمْ قَلِيلٌ مُّسْتَضْعَفُونَ فِى ٱلْأَرْضِ تَخَافُونَ أَن يَتَخَطَّفَكُمُ ٱلنَّاسُ فَـَٔاوَىٰكُمْ وَأَيَّدَكُم بِنَصْرِهِۦ وَرَزَقَكُم مِّنَ ٱلطَّيِّبَٰتِ لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿٢٦﴾

27. Kuwa (xaqa) rumeeyow ha khayaamina Alle iyo Rasuulka iyo ammaanadiinna idinkoo og.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تَخُونُواْ ٱللَّهَ وَٱلرَّسُولَ وَتَخُونُوٓاْ أَمَٰنَٰتِكُمۡ وَأَنتُمۡ تَعۡلَمُونَ ٢٧

28. Ogaadana in xoolihiinnu iyo caruurtiinnu fidno uun yihiin oo Alle agtiisa ajir wayn yahay.

وَٱعۡلَمُوٓاْ أَنَّمَآ أَمۡوَٰلُكُمۡ وَأَوۡلَٰدُكُمۡ فِتۡنَةٞ وَأَنَّ ٱللَّهَ عِندَهُۥٓ أَجۡرٌ عَظِيمٞ ٢٨

29. Kuwa (xaqa) rumeeyow haddaad ka dhawrsataan Alle wuxuu idiin yeeli faraj (iyo nabadgalyo) wuxuuna asturi xumaantiinna «dambigiinna», wuuna idiin dhaafi. Alle na waa fadli wayne.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِن تَتَّقُواْ ٱللَّهَ يَجۡعَل لَّكُمۡ فُرۡقَانٗا وَيُكَفِّرۡ عَنكُمۡ سَيِّـَٔاتِكُمۡ وَيَغۡفِرۡ لَكُمۡۗ وَٱللَّهُ ذُو ٱلۡفَضۡلِ ٱلۡعَظِيمِ ٢٩

Xumaanta haddaan layska reebin kuma kaliyeysato adduunka ciddii fashay kaliya, ee way wada heli ciddii ku dhaw oon xumaanta reebin sida xadiithyo badan ku sugnaaday, waana arrin ay waajib tahay in si dhaba loo garto looguna camal falo. Tan kale waxay ahaayeen muslimiintii Makaad kuwo tabar yar oo cabsada Alle ayaase xoojiyey oo Madiino dejiyey una gargaaray, oo rizqi fiican ku arzaaqay, waana wax la xusuusto oon la halmaami karin, tan kale waa inaan la khayaamin Alle, diinta, Nabiga, ammaanada iyo xaqa isagoo la og yahay, lana garto in xoolaha iyo carruurtu fidmo iyo imtixaan yihiin ee wanaag iyo ajir Alle agtiisa yaallo, ciddii si fiican u dhawrsatana Alle wuxuu u furi faraj, wuuna asturi, una dambi dhaafi illeen fadligiisaa waasac ahe, isagaana awoodda lehe. **[Al-Anfaal: 25-29].**

30. Xusuuso (Nabiyow) markay ku dhakrayeen kuwii gaaloobay inay ku xidhaan, ama ku dilaan ama ku bixiyaan, way ku dhakrayeen Alle ayaase dhakrayey, isagaana inta wax dhagarta u khayr roon.

وَإِذۡ يَمۡكُرُ بِكَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لِيُثۡبِتُوكَ أَوۡ يَقۡتُلُوكَ أَوۡ يُخۡرِجُوكَۚ وَيَمۡكُرُونَ وَيَمۡكُرُ ٱللَّهُۖ وَٱللَّهُ خَيۡرُ ٱلۡمَٰكِرِينَ ٣٠

31. Marka lagu akhriyo aayaadkannaga waxay dhahaan waan maqallay haddaan doonnana waan dhahaynaa kanoo kale (quraanka), kanu

وَإِذَا تُتۡلَىٰ عَلَيۡهِمۡ ءَايَٰتُنَا قَالُواْ قَدۡ سَمِعۡنَا لَوۡ نَشَآءُ لَقُلۡنَا مِثۡلَ هَٰذَآ إِنۡ هَٰذَآ إِلَّآ أَسَٰطِيرُ ٱلۡأَوَّلِينَ ٣١

waxaan warkii kuwii hore ahayn ma aha.

32. Xusuuso markay dheheen Allow hadduu kanu xaqa agtaada ah yahay nagaga soo daadi dhagaxyo (naara) samada, ama noo keen cadaab daran.

وَإِذْ قَالُواْ ٱللَّهُمَّ إِن كَانَ هَٰذَا هُوَ ٱلْحَقَّ مِنْ عِندِكَ فَأَمْطِرْ عَلَيْنَا حِجَارَةً مِّنَ ٱلسَّمَآءِ أَوِ ٱئْتِنَا بِعَذَابٍ أَلِيمٍ ﴿٣٢﴾

33. Alle se ma aha kii cadaaba adoo dhex jooga, mana aha mid cadaaba iyagoo dambi dhaaf warsan (oo gaalnimo ka soo noqon).

وَمَا كَانَ ٱللَّهُ لِيُعَذِّبَهُمْ وَأَنتَ فِيهِمْ ۚ وَمَا كَانَ ٱللَّهُ مُعَذِّبَهُمْ وَهُمْ يَسْتَغْفِرُونَ ﴿٣٣﴾

Gaaladii qureesheed dhagar bay u sameeyeen Nabigii (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) waxayna ku shireen daaru nadwa markay wax badan hadleenna waxaa arrin soo jeediyey Abuu Jahal wuxuuna soo jeediyey in meel kasta wiil xoog leh laga keeno markaas seefo loo dhiibo Nabigana hal mar kuwada dhuftaan si qaraabadiisu mag u qaadato illeen lama colloobi karaan dadkoo dhane, waxayna isku waafaqeen ra'yigaas, Alle ayaase ogaysiiyey Nabigiisa arrintiina gacantooda ka bixiyey oo nabadgaliyey Nabigi, waana kii baxay ee godka galay isaga iyo sayid abuu bakar, ka dibna madiina aadeen. Waxayna ahaayeen gaaladaasu kuwa marka lagu akhriyo quraanka yidhaahda maqallay, haddaan doonno waan dhihi lahayn isagoo kale, waana warkii dadkii hore, waxayna codsadeen in Alle cadaab cirka kaga soo daayo hadduu quraanku xaq yahay, taasina waa doqonnimo, wax Alle la warsadana ma aha, ee waxaa habboon in la dhaho allow nugu hanuuni xaqa, Allase ma cadaabo Nabigoo dhex jooga ama iyagoo dambi dhaaf warsan, illeen way dawaafi jireene.

Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: waxaa jiray labo ammaan, Nabigii iyo dambi dhaaf warsasho, waxaase tegey Nabigii, waxaana hadhay dambi dhaaf dooniddii. **[Al-Anfaal: 30-33].**

34. Muxuusanse Alle u cadaabayn iyagoo ka celin dadka masjidka xurmada leh, mana aha ehelkiisa, ehelkiisu waxaan kuwa dhawrsada ahayn ma aha, badankoodse ma oga.

وَمَا لَهُمْ أَلَّا يُعَذِّبَهُمُ ٱللَّهُ وَهُمْ يَصُدُّونَ عَنِ ٱلْمَسْجِدِ ٱلْحَرَامِ وَمَا كَانُوٓاْ أَوْلِيَآءَهُۥٓ ۚ إِنْ أَوْلِيَآؤُهُۥٓ إِلَّا ٱلْمُتَّقُونَ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٣٤﴾

35. Salaaddooda kacbada agteeda ahna ma aha waxaan foodhi iyo sacabbo tumid ahayn, ee dhadhamiya cadaabka gaalnimadiinna darteed.

وَمَا كَانَ صَلَاتُهُمْ عِندَ ٱلْبَيْتِ إِلَّا مُكَآءً وَتَصْدِيَةً ۚ فَذُوقُواْ ٱلْعَذَابَ بِمَا كُنتُمْ تَكْفُرُونَ ﴿٣٥﴾

36. Kuwii gaaloobay waxay ku bixin xoolahooda inay ka celiyaan dadka jidka Alle, way bixin doonaan waxayna ku noqon qoomammo, markaasaa laga adkaan, kuwa gaaloobayna xagga jahannamaa loo kulmin.

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ يُنفِقُونَ أَمْوَٰلَهُمْ لِيَصُدُّواْ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ ۚ فَسَيُنفِقُونَهَا ثُمَّ تَكُونُ عَلَيْهِمْ حَسْرَةً ثُمَّ يُغْلَبُونَ ۗ وَٱلَّذِينَ كَفَرُوٓاْ إِلَىٰ جَهَنَّمَ يُحْشَرُونَ ﴿٣٦﴾

37. In Alle kala bixiyo xumaanta iyo wanaagga, yeelana xumaanta qaarkeed tan kale korkeeda uuna kulmin dhammaan uuna yeeli jahannamo, kuwaasuna waa uun kuwa khasaaray.

لِيَمِيزَ ٱللَّهُ ٱلْخَبِيثَ مِنَ ٱلطَّيِّبِ وَيَجْعَلَ ٱلْخَبِيثَ بَعْضَهُۥ عَلَىٰ بَعْضٍ فَيَرْكُمَهُۥ جَمِيعًا فَيَجْعَلَهُۥ فِى جَهَنَّمَ ۚ أُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْخَٰسِرُونَ ﴿٣٧﴾

Gaaladu way mutaan ciqaabta iyo cadaabkaba, illeen waxay dadka ka celiyaan masaajidka xurmaysan, oo ayna mudnayn inay daris la noqdaan waxaase mudan inuu gacanta ku hayo muslimiinta. Gaaladuna dhab ahaan ugama yaabaan Alle, cibaadadooduse waa foodhi, buuq iyo sacabbo tun, abaalkooduna waa cadaab gaalnimadooda darteed, waxay gaaladu bixin oo xoola ah inay jidka Alle ka leexiyaan, way bixin waxayse ku noqon khasaare, waana laga adkaan, naarta jahannamana waa lagu kulmin, si Alle u kala saaro xumaanta iyo wanaagga, xumaanta wuu kulmiyaa dhammaanna yeelaa naarta jahannamo, waana kuwa khasaaray.

Ibnu Isxaaq wuxuu sheegay in Cabdullahi binu Rabiica, Cigrama Abuu Jahal iyo Safwaan binu Umaya u tageen Abii sufyaan dagaalkii badar ee lagu laayey qaraabadoodii inay oggolaadaan safarkii Abuu Sufyaan hoggaaminayey ee dagaalku ku billowday xoolihiisa in lagu bixiyo la dagaallanka Nabiga iyo muslimiinta, markaasaa waxaa soo degtay aayadahan. Badar bay ku soo degeenna waa la yidhi, waxaase dhaba in gaalo khasaari. **[Al-Anfaal: 34-37].**

38. Ku dheh kuwii gaaloobay hadday ka reebtoomaan (gaalnimada) waxaa loo dhaafi wixii hor

قُل لِّلَّذِينَ كَفَرُوٓاْ إِن يَنتَهُواْ يُغْفَرْ لَهُم مَّا قَدْ سَلَفَ وَإِن يَعُودُواْ فَقَدْ مَضَتْ

maray, haddayse daa'imaan (gaalnimada) waxaa tagtay «horraysay» jidkii kuwii hore.

سُنَّتُ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿٣٨﴾

39. La dagaallama gaalada intaan gaalnimo iyo «xumaan» laga helin, una ahaato diintu dhammaan Alle, hadday reebtoomaan Alle waxay fali wuu arkayaa.

وَقَٰتِلُوهُمْ حَتَّىٰ لَا تَكُونَ فِتْنَةٌ وَيَكُونَ ٱلدِّينُ كُلُّهُۥ لِلَّهِ ۚ فَإِنِ ٱنتَهَوْا۟ فَإِنَّ ٱللَّهَ بِمَا يَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿٣٩﴾

40. Hadday jeedsadaanna ogaada in Alle yahay gargaarihiinna, isagaana u fiican gargaare.

وَإِن تَوَلَّوْا۟ فَٱعْلَمُوٓا۟ أَنَّ ٱللَّهَ مَوْلَىٰكُمْ ۚ نِعْمَ ٱلْمَوْلَىٰ وَنِعْمَ ٱلنَّصِيرُ ﴿٤٠﴾

41. Ogaadana waxaad qaniimaysataan in Alle shan meelood meel leeyahay, iyo Rasuulku, iyo qaraabada, iyo agoonta, iyo masaakiinta, iyo socdaalka, haddaad tihiin kuwo rumeeyey Alle iyo waxaan ku dejinnay addoonkannaga maalintii kala bixinta, maalintay kulmeen labadii col (Badar) Alle na wax kasta wuu karaa.

* وَٱعْلَمُوٓا۟ أَنَّمَا غَنِمْتُم مِّن شَىْءٍ فَأَنَّ لِلَّهِ خُمُسَهُۥ وَلِلرَّسُولِ وَلِذِى ٱلْقُرْبَىٰ وَٱلْيَتَٰمَىٰ وَٱلْمَسَٰكِينِ وَٱبْنِ ٱلسَّبِيلِ إِن كُنتُمْ ءَامَنتُم بِٱللَّهِ وَمَآ أَنزَلْنَا عَلَىٰ عَبْدِنَا يَوْمَ ٱلْفُرْقَانِ يَوْمَ ٱلْتَقَى ٱلْجَمْعَانِ ۗ وَٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿٤١﴾

Alle waa naxariiste wuxuuna u dhaafaa wixii hore ciddii gaalnimada ka soo noqota oo xumaanta ka toobad keenta, sida ku aroortay xadiith: islaamku wuu tiraa wixii ka horreeyey, toobadduna way tirtaa wixii ka horreeyey. Ciddii xumaan ku noqota way caddahay waddadii kuwii hore. Waana in gaalada lala dagaallamo intaan xumaan laga helin, diintuna dhammaan Alle u ahaato, ciddii xumaanta ka joogtana Alle wuu arkaa, ciddii jeedsatana Alle ayaa uga gargaari mu'miniinta, kaalmeeye iyo gargaarana Alle ayaa u fiican. Wixii gaalada laga helo waqtiga dagaalkana shan meelood meel waxaa loo iili jidka Alle iyo Rasuulkiisa, qaraabada Nabiga oo sako la siinayn, agoonta, masaakiinta, iyo socdaalka, haddii dhab loo rumeeyey Alle iyo quraanka, waana xoolo xalaala oo lagu xoojin islaamka iyo xaqa, laguna wiiqi gaalada. **[Al-Anfaal: 38-41].**

إِذْ أَنتُم بِٱلْعُدْوَةِ ٱلدُّنْيَا وَهُم بِٱلْعُدْوَةِ ٱلْقُصْوَىٰ وَٱلرَّكْبُ أَسْفَلَ مِنكُمْ ۚ وَلَوْ تَوَاعَدتُّمْ لَٱخْتَلَفْتُمْ فِى ٱلْمِيعَٰدِ وَلَٰكِن لِّيَقْضِىَ ٱللَّهُ أَمْرًا كَانَ مَفْعُولًا لِّيَهْلِكَ مَنْ هَلَكَ عَنۢ بَيِّنَةٍ وَيَحْيَىٰ مَنْ حَىَّ عَنۢ بَيِّنَةٍ ۗ وَإِنَّ ٱللَّهَ لَسَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٤٢﴾

42. Xuxuusta markaad ahaydeen dhinicii u dhawaa (Badar) gaaladuna ahayd dhinicii ka fogaa (Badar) safarkiina idinka hooseeyey hadaad isu yaboohdaan (ballanna) waad is ku khilaafi lahaydeen ballanka, Alle ayaase (idin kulmiyay) inuu xukumo amar uu fali, in ciddii halaagsamina si cad u halaagsanto, ciddii noolaanna si cad u noolaato, Alle na waa maqle og.

إِذْ يُرِيكَهُمُ ٱللَّهُ فِى مَنَامِكَ قَلِيلًا ۖ وَلَوْ أَرَىٰكَهُمْ كَثِيرًا لَّفَشِلْتُمْ وَلَتَنَٰزَعْتُمْ فِى ٱلْأَمْرِ وَلَٰكِنَّ ٱللَّهَ سَلَّمَ ۚ إِنَّهُۥ عَلِيمٌۢ بِذَاتِ ٱلصُّدُورِ ﴿٤٣﴾

43. Markuu idinku tusiyey Alle gaalada hurdada iyagoo yar, hadduu ku tusiyo iyagoo badanna waad fashili lahaydeen ood ku murmi lahaydeen amarka, Alle ayaase nabadgaliyey, illeen wuu og yahay waxa laabta ku sugane.

وَإِذْ يُرِيكُمُوهُمْ إِذِ ٱلْتَقَيْتُمْ فِىٓ أَعْيُنِكُمْ قَلِيلًا وَيُقَلِّلُكُمْ فِىٓ أَعْيُنِهِمْ لِيَقْضِىَ ٱللَّهُ أَمْرًا كَانَ مَفْعُولًا ۗ وَإِلَى ٱللَّهِ تُرْجَعُ ٱلْأُمُورُ ﴿٤٤﴾

44. Iyo markuu idin tusiyey markaad kulanteen iyagoo ku yar indhihiinna, idinkuna yareeyey indhahooda in Alle xukumo amar uu fali, xagga Alle ayaana loo celin umuuraha.

Muslimiintu waxay degeen daanta badar ee xigta xagga madiino, gaaladuna xagga maka jahadeeda, safarkiina maray xagga badda, Alle na kulmiyey si ciddii halaagsami iyo tan noolaanba xaalku u caddaado, wuxuuna Alle isu muujiyey labada kooxood iyadoo midba la yar tahay midda kale, in Alle sugo guusha islaamka, saasayna u kulmeen labadaas col, oo midna xaqa iyo islaamka matalayo, midka kalana gaalnimo iyo isla wayni, wuxuuna Ibnu Jariir sheegay in Abuu Sufyaan u cid diray gaaladii qureesheed kuna yidhi: noqda waa nabadgalaye, waxaase diiday Abuu Jahal oo sheegay inayna noqonayn intay ka tagaan ceelka Badar, saddex maalmoodna ku nagaadaan oo cunno ku cunaan,

geelna ku qashaan, khamrana ku cabbaan, gabduhuna durbaan u garaacaan oo carabtuna maqasho, qaddariyaanna, Nabiguna wuxuu yidhi: maka waxay idinku soo tuurtay beerkeedii, waana kaas xaq iyo xumaan. **[Al-Anfaal: 42-44].**

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِذَا لَقِيتُمْ فِئَةً فَٱثْبُتُواْ وَٱذْكُرُواْ ٱللَّهَ كَثِيرًا لَّعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿٤٥﴾

45. Kuwa xaqa rumeeyow haddaad la kulantaan koox (cadow ah) sugnaada, xusana Alle wax badan, inaad liibaantaan.

وَأَطِيعُواْ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ وَلَا تَنَـٰزَعُواْ فَتَفْشَلُواْ وَتَذْهَبَ رِيحُكُمْ ۖ وَٱصْبِرُوٓاْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ مَعَ ٱلصَّـٰبِرِينَ ﴿٤٦﴾

46. Adeecana Alle iyo Rasuulkiisa hana murmina ood fashishaan, uu tagana xooggiinnu, samra, Alle wuxuu la jiraa kuwa samree (adkaysta).

وَلَا تَكُونُواْ كَٱلَّذِينَ خَرَجُواْ مِن دِيَـٰرِهِم بَطَرًا وَرِئَآءَ ٱلنَّاسِ وَيَصُدُّونَ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ ۚ وَٱللَّهُ بِمَا يَعْمَلُونَ مُحِيطٌ ﴿٤٧﴾

47. Hana ka mid noqonnina kuwii ka baxay guryahooda kibir iyo istuska dadka dartiis kana celinaya (dadka) jidka Alle, Alle na waa koobay waxay camal fali.

وَإِذْ زَيَّنَ لَهُمُ ٱلشَّيْطَـٰنُ أَعْمَـٰلَهُمْ وَقَالَ لَا غَالِبَ لَكُمُ ٱلْيَوْمَ مِنَ ٱلنَّاسِ وَإِنِّى جَارٌ لَّكُمْ ۖ فَلَمَّا تَرَٰٓءَتِ ٱلْفِئَتَانِ نَكَصَ عَلَىٰ عَقِبَيْهِ وَقَالَ إِنِّى بَرِىٓءٌ مِّنكُمْ إِنِّىٓ أَرَىٰ مَا لَا تَرَوْنَ إِنِّىٓ أَخَافُ ٱللَّهَ ۚ وَٱللَّهُ شَدِيدُ ٱلْعِقَابِ ﴿٤٨﴾

48. Markuu u qurxiyey shaydaanku camalkooda kuna yidhi wax idinka adkaan oo dada ma jiro maanta, anna kaalmeeyaan idiin ahay, markay is arkeen labadii kooxoodna wuxuu u gurtay cidhibtiisa, wuxuuna yidhi: anugu bari baan idinka ahay, waxaana arkaa waxaydaan arkin, waxaanna ka cabsan Alle, ilaahayna waa ciqaab darane.

إِذْ يَقُولُ ٱلْمُنَـٰفِقُونَ وَٱلَّذِينَ فِى قُلُوبِهِم مَّرَضٌ غَرَّ هَـٰٓؤُلَآءِ دِينُهُمْ ۗ وَمَن يَتَوَكَّلْ عَلَى ٱللَّهِ فَإِنَّ ٱللَّهَ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٤٩﴾

49. Markay dhahayeen munaafiqiintu iyo kuwa cudurku qalbiga kaga jiro, waxaa dhagray kuwaas diintooda, ciddii Alle tala saarata ilaahay waa adkaade falsan.

Waa in la sugnaado marka colka lala kulmo oon la cararin, Alle na la xuso, lana adeeco Alle iyo Rasuulkiisa, lana murmin si aan loo fashilin loona tabar yaraan, waana in la adkaysto illeen Alle wuxuu la jiraa cidda adkaysatee, lana mid noqonnin sidii gaaladii reer Makaad ee kibirka iyo is tustuska dadka iyo xaqa ka leexintiisa u soo baxday, shaydaanna u qurxiyey camalkooda una sheegay inaan laga adkaanayn, una gargaari, markay labadii col kulmeenna dib u gurtay, sheegayna inuu arko waxayna arag, sheegayna inuu Alle ka yaabi isagoo been sheegi, munaafiqiinta iyo kuwa qalbiga ka bukana ku sheegi mu'miniinta in diintoodu khaladday, beenna u sheegtay, ciddiise Alle tala saarata isagaa adkaada ah falsan, waxaana muuqda in la adkaysto Alle na lagu xidhnaado, kibir, istus, iyo shaydaanna laga fogaado. **[Al-Anfaal: 45-49].**

وَلَوْ تَرَىٰٓ إِذْ يَتَوَفَّى ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ ٱلْمَلَٰٓئِكَةُ يَضْرِبُونَ وُجُوهَهُمْ وَأَدْبَٰرَهُمْ وَذُوقُواْ عَذَابَ ٱلْحَرِيقِ ﴿٥٠﴾

50. Haddaad aragto markay oofsan (nafta ka qaadi) malaa'igtu kuwii gaaloobay oy ka garaaci wajiyadooda iyo gadaashooda iyagoo ku dhihi dhadhamiya cadaabka gubidda (waxaad arki lahayd arrin wayn).

ذَٰلِكَ بِمَا قَدَّمَتْ أَيْدِيكُمْ وَأَنَّ ٱللَّهَ لَيْسَ بِظَلَّٰمٍ لِّلْعَبِيدِ ﴿٥١﴾

51. Arrintaasuna waa waxay hormarsatay gacmihiinnu darteed Alle na ma dulmiyo addoomada.

كَدَأْبِ ءَالِ فِرْعَوْنَ وَٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ ۚ كَفَرُواْ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ فَأَخَذَهُمُ ٱللَّهُ بِذُنُوبِهِمْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ قَوِىٌّ شَدِيدُ ٱلْعِقَابِ ﴿٥٢﴾

52. Waa caadadii fircoon qomkiisii iyo kuwii ka horreeyey ee ka gaaloobay aayaadkii Alle oo Alle qabtay dambigooda dartiis, Alle na waa xoog badane ciqaab daran.

ذَٰلِكَ بِأَنَّ ٱللَّهَ لَمْ يَكُ مُغَيِّرًا نِّعْمَةً أَنْعَمَهَا عَلَىٰ قَوْمٍ حَتَّىٰ يُغَيِّرُواْ مَا بِأَنفُسِهِمْ وَأَنَّ ٱللَّهَ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٥٣﴾

53. Arrintaasna waa inaan Alle doorinnin nicmo uu ugu nicmeeyey qoom intay ka dooriyaan waxa naftooda ah, Alle na waa maqle og.

كَدَأْبِ ءَالِ فِرْعَوْنَ وَٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ ۚ كَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِ رَبِّهِمْ فَأَهْلَكْنَٰهُم

54. Waa caadadii Fircoon qoomkiisii iyo kuwii ka horreeyey, waxay ka gaaloobeen aayaadkii Rabbigood

markaasuu halaagay dambigooda dartiis waxayna dhammaan ahaayeen daalimiin.

بِذُنُوبِهِمْ وَأَغْرَقْنَآ ءَالَ فِرْعَوْنَ ۚ وَكُلٌّ كَانُوا۟ ظَٰلِمِينَ ﴿٥٤﴾

Geeridu waa wax wayn, saas darteed yuu Alle u sheegay Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) in hadduu arko gaalada oo malaa'igtu nafta ka qaadi kana garaaci wajiga iyo gadaasha kuna dhihi dhadhamiya cadaabka gubidda inuu arki lahaa arrin wayn, waana waxay hormarsadeen gacmahoodu illeen Alle ma dulmiyo addoomadee, waxayna la mid yihiin Fircoon iyo dadkiisii iyo kuwii ka horreeyey ee ka gaaloobay aayaadka Alle oo Alle qabtay dambigoodii dartiis, Alle na waa xoog badane ciqaabtiisuna daran tahay, waxaana ugu wacan inaan Alle dad ka doorinnin nicmo uu ugu nicmeeyey intay naftooda ka dooriyaan, dambina falaan, illeen Alle waa maqle oge, sidaasna waxaa falay Fircoon iyo dadkiisii iyo kuwii ka horreeyey oo beeniyey aayadkii Alle markaasna Alle halaagay dambigooda dartiis, Fircoon iyo colkiisiina wuu maansheeyey illeen daalimiin bay ahaayeene. **[Al-Anfaal: 50-54].**

إِنَّ شَرَّ ٱلدَّوَآبِّ عِندَ ٱللَّهِ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ فَهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٥٥﴾

55. Dhul socde waxa ugu shar badan Alle agtiisa kuwa gaaloobay oon rumeynin.

ٱلَّذِينَ عَٰهَدتَّ مِنْهُمْ ثُمَّ يَنقُضُونَ عَهْدَهُمْ فِى كُلِّ مَرَّةٍ وَهُمْ لَا يَتَّقُونَ ﴿٥٦﴾

56. Ee ah kuwaad la ballantay markaas buriya ballankooda mar kasta, oon dhawrsanayn.

فَإِمَّا تَثْقَفَنَّهُمْ فِى ٱلْحَرْبِ فَشَرِّدْ بِهِم مَّنْ خَلْفَهُمْ لَعَلَّهُمْ يَذَّكَّرُونَ ﴿٥٧﴾

57. Haddaad ku liibaanto (adkaato) dagaalka ku eri (xanuuji) kuwa ka dambeeya inay xusuustaan.

وَإِمَّا تَخَافَنَّ مِن قَوْمٍ خِيَانَةً فَٱنۢبِذْ إِلَيْهِمْ عَلَىٰ سَوَآءٍ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُحِبُّ ٱلْخَآئِنِينَ ﴿٥٨﴾

58. Haddaad ka cabsato qoom khayaanadii u tuur (ogaysii) ballankii si siman, illeen Alle ma jecla khaa'imiinta.

وَلَا يَحْسَبَنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ سَبَقُوٓا۟ ۚ إِنَّهُمْ لَا يُعْجِزُونَ ﴿٥٩﴾

59. Yeyna u malayn kuwii gaaloobay inay carari (karaan) iyagu ma daaliyaan (Alle).

وَأَعِدُّوا۟ لَهُم مَّا ٱسْتَطَعْتُم مِّن قُوَّةٍ وَمِن رِّبَاطِ ٱلْخَيْلِ تُرْهِبُونَ بِهِۦ

60. Ugu darbada waxaad kartaan oo xooga, iyo darbidda fardaha inaad ku cabsi galisaan colka

عَدُوَّ ٱللَّهِ وَعَدُوَّكُمْ وَءَاخَرِينَ مِن دُونِهِمْ لَا تَعْلَمُونَهُمُ ٱللَّهُ يَعْلَمُهُمْ ۚ وَمَا تُنفِقُواْ مِن شَىْءٍ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ يُوَفَّ إِلَيْكُمْ وَأَنتُمْ لَا تُظْلَمُونَ ﴿٦٠﴾

Alle iyo colkiinna (gaalada) iyo kuwa kale oo ka soo hadhay (munaafiqiinta) ma ogidin Alle ayaase og, waxaad ku bixisaan jidka Alle na waa laydiin oofin (dhammayn) idinkoon laydin dulmiyeyn.

Aayadahanna wuxuu Alle ku sheegay in waxa dhulka ku socda uu ugu liito gaalada beenisay xaqa, een waliba rumaynayn, oo buriya ballanka Nabiga markasta, oon dhawrsanaynna, Alle ayaana faray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) in cidduu ka helo kuwaas dagaalka uu xanuunjiyo si kuwa ka dambeeya u cabsadaan, una xusuustaan, hadduu khayaamadooda ka yaabana uu ogaysiiyo inuu ballankoodii u celiyey aaminaynna mar kale, illeen Alle ma jecla khaa'imiintee, yeyna u malayn gaaladu inay Alle ka carari karaan wuxuuna Alle faray muslimiinta inay u darbadaan dagaalka gaalada una hub samaystaan, iyagoo ku cabsi galin gaalada colka u ah Alle iyo muslimiinta, kuwa la og yahay iyo kuwa Alle uun og yahay, jidka Alle na wax lagu bixiyo, si Alle ugu oofiyo wanaagga oon loona dulmiyin. Waxaana ku soo arooray wanaagga dagaal barashada iyo hubka xadiithyo badan sida: fardaha fuuliddooda waxaa lagu xidhay khyar tan iyo qiyaamada, iyo gana oo kora ganiddaana ka khayr roon koridda. Taasina waxay muujin inay waajib tahay in loo darbado jahaadka iyo daaficidda diinta, xoolaha, dhulka iyo sharafta, markay ka tageen muslimiintuna amarkii Alle yey dulloobeen, gaalana u talisay, jahaad umbaana ka saari kara. **[Al-Anfaal: 55-60].**

* وَإِن جَنَحُواْ لِلسَّلْمِ فَٱجْنَحْ لَهَا وَتَوَكَّلْ عَلَى ٱللَّهِ ۚ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْعَلِيمُ ﴿٦١﴾

61. Hadday u iishaan gaaladu nabad u iilo adna, talana saaro Alle, illeen isagaa uun maqla ognee.

وَإِن يُرِيدُوٓاْ أَن يَخْدَعُوكَ فَإِنَّ حَسْبَكَ ٱللَّهُ ۚ هُوَ ٱلَّذِىٓ أَيَّدَكَ بِنَصْرِهِۦ وَبِٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٦٢﴾

62. Hadday doonaan inay ku dhagraan waxaa kaafiyahaaga ah Alle, waana kan kugu xoojiyay gargaarkiisa iyo mu'miniinta.

وَأَلَّفَ بَيْنَ قُلُوبِهِمْ ۚ لَوْ أَنفَقْتَ مَا فِى ٱلْأَرْضِ جَمِيعًا مَّآ أَلَّفْتَ بَيْنَ قُلُوبِهِمْ وَلَٰكِنَّ ٱللَّهَ أَلَّفَ بَيْنَهُمْ ۚ إِنَّهُۥ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٦٣﴾

63. Isuna soo dumay quluubtooda, haddaad bixiso waxa dhulka ku sugan oo dhan maadan isu dunteen quluubtooda, Alle ayaase isu dumay dhexdooda illeen isagaa adkaade falsan ehe.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِيُّ حَسۡبُكَ ٱللَّهُ وَمَنِ ٱتَّبَعَكَ مِنَ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ ﴿٦٤﴾

64. Nabiyow waxaa kugu filan Alle adi iyo inta ku raacday ee mu'mininta ah.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِيُّ حَرِّضِ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ عَلَى ٱلۡقِتَالِۚ إِن يَكُن مِّنكُمۡ عِشۡرُونَ صَـٰبِرُونَ يَغۡلِبُواْ مِاْئَتَيۡنِۚ وَإِن يَكُن مِّنكُم مِّاْئَةٞ يَغۡلِبُوٓاْ أَلۡفٗا مِّنَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ بِأَنَّهُمۡ قَوۡمٞ لَّا يَفۡقَهُونَ ﴿٦٥﴾

65. Nabiyow ku boorri mu'mininta dagaalka hadday idinka mid yihiin labaatan samra (adkaysta) waxay ka adkaan labo boqol, hadday idinka mid yihiin boqol waxay ka adkaan kun ah kuwa gaaloobay, illeen waa qoomaan wax kasayne.

Diinta islaamku waa diin nabad galyo, isjaceyl, iskaalmayn, saas darteed yuu Alle faray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) in hadday gaaladu u leexdaan oo doonaan nabad iyo dagaal la'aan Nabiguna u leexdo, Alle na talo saarto, kana digtoonaado. Illeen Alle ayaa wax maqla waxna oge, hadday doonaan inay khayaamaan oo dhagraan Nabigana waxaa ku filan Allaha ku xoojiyey gargaarkiisa iyo mu'mininta, isuna dumay quluubta mu'mininta, illeen waxa dhulka ku sugan oo dhan haddii la bixiyo cidina isuma dumi karto quluubtoodee, Alle ayaase isu dumay, illeen isagaa adkaada oo falsame, kaafiyana Nabiga iyo mu'miintee, tan kale waa in mu'miintu dagaallamaan xaqana difaacaan haba ka badnaadeen gaaladuye, illeen muslimiinta waxaa laga rabaa adkaysi, rumayn xaqa, iyo jahaad dhab ah, gaalana way jabi oo halaagsami hadday la dagaallamaan muslimiintii dhaba oo geerida oggol Alle na ku xidhan dhabna u rumeysan. **[Al-Anfaal: 61-65].**

ٱلۡـَٰٔنَ خَفَّفَ ٱللَّهُ عَنكُمۡ وَعَلِمَ أَنَّ فِيكُمۡ ضَعۡفٗاۚ فَإِن يَكُن مِّنكُم مِّاْئَةٞ صَابِرَةٞ يَغۡلِبُواْ مِاْئَتَيۡنِۚ وَإِن يَكُن مِّنكُمۡ أَلۡفٞ يَغۡلِبُوٓاْ أَلۡفَيۡنِ بِإِذۡنِ ٱللَّهِۗ وَٱللَّهُ مَعَ ٱلصَّـٰبِرِينَ ﴿٦٦﴾

66. Hadda wuu idinka fududeeyey Alle wuxuuna og yahay inaad tabar yar tihiin, hadday idinka mid yihiin boqol samra (adkaysta) waxay ka adkaan labo boqol, hadday idinka mid yihiin kunna waxay ka adkaan labo kun idanka Alle, ilaahayna wuxuu la jiraa kuwa samra.

مَا كَانَ لِنَبِيٍّ أَن يَكُونَ لَهُۥٓ أَسۡرَىٰ حَتَّىٰ يُثۡخِنَ فِي ٱلۡأَرۡضِۚ تُرِيدُونَ

67. Kuma habboona Nabi inay u ahaato kuwo la qafaashay intuu kaga jilciyo dhulka dhexdiisa

(gaalada) waxaad doonaysaan muuqa addunyada Alle na wuxuu dooni aakhiro, Alle na waa adkaade falsan.

عَرَضَ ٱلدُّنۡيَا وَٱللَّهُ يُرِيدُ ٱلۡأٓخِرَةَۗ وَٱللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٞ ٦٧

68. Hadduusan jirin kitaab Alle oo horreeyey waxaa idin taaban lahaa waxaad qaadateen darteed cadaab wayn.

لَّوۡلَا كِتَٰبٞ مِّنَ ٱللَّهِ سَبَقَ لَمَسَّكُمۡ فِيمَآ أَخَذۡتُمۡ عَذَابٌ عَظِيمٞ ٦٨

69. Ee cuna waxaad qaniimaysataan oo xalaal fiicana, kana dhawrsada Alle, illeen Ilaahay waa dhaafe naxariistee.

فَكُلُواْ مِمَّا غَنِمۡتُمۡ حَلَٰلٗا طَيِّبٗاۚ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَۚ إِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٞ رَّحِيمٞ ٦٩

Ibnu Cabbaas waxaa laga wariyey in markay soo degtay aayadda caddayn in labaatan muslimiina la dagaallamaan labo boqol oo gaala ah ay ku cuslaatay muslimiintii, markaas Alle soo dejiyey aayadahan ka fududayn oo ah in boqolku la dagaallamaan labo boqol, kunkuna labo kun la dagaallamo, markay samraan oo adkaystaan Alle ayaa u gargaari, saasuuna xaalku ku sugnaaday, sina uma bannaana in markaas la cararo ama la cabsado, markii maalintii Badar qaar la laayey gaaladii qaarna la qafaashay yuu Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) la tashaday asaxaabta sidii la yeeli lahaa dadkaas, markaasuu sayid Abuubakar yidhi: aan daynno oon la layn, sayid Cumarna yidhi ha la laayo, markii la raacay soo jeedintii sayid Abuubakarna waxaa soo degtay aayadahan oo canaan ah, iyo inay habboon tahay in Alle la adeeco, adduunna loo xilan, saasna uu ku xalaaleeyey qaniimada laga helo gaalada, waxaana muslimiinta ku waajiba jahaad, adkaysi iyo Alle adeecid. **[Al-Anfaal: 66-69].**

70. Nabiyow ku dheh kuwa la qafaashay ee gacmihiinna ku jira hadduu ku og yahay Alle quluubtiinna khayr wuxuu idin siin mid ka khayr roon wixii laydinka qaaday, wuuna idiin dhaafi, Alle na waa dhaafe naxariista.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِيُّ قُل لِّمَن فِيٓ أَيۡدِيكُم مِّنَ ٱلۡأَسۡرَىٰٓ إِن يَعۡلَمِ ٱللَّهُ فِي قُلُوبِكُمۡ خَيۡرٗا يُؤۡتِكُمۡ خَيۡرٗا مِّمَّآ أُخِذَ مِنكُمۡ وَيَغۡفِرۡ لَكُمۡۚ وَٱللَّهُ غَفُورٞ رَّحِيمٞ ٧٠

71. Hadday doonaan khiyaamadaadana waxay

وَإِن يُرِيدُواْ خِيَانَتَكَ فَقَدۡ خَانُواْ ٱللَّهَ

khayaameen Alle mar hore markaasuu idin makaniyey. Alle na waa oge falsan.

مِن قَبۡلُ فَأَمۡكَنَ مِنۡهُمۡۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٞ ٧١

72. Kuwa rumeeyey ee hijrooday ee ku jahaaday xoolahooda iyo naftooda jidka Alle iyo kuwa dumay (soo dhaweeyey) una gargaaray kuwaasu qaarkood waa gargaaraha qaar, kuwa rumeeyey oon hijroonnin gargaarkooda waxba idinkama saarra intay ka hijrooni, haddayse idinka gargaar warsadaan diinta darteed korkiinna gargaarbaa ah, qaar dhexdiinna ballan yahay mooyee, Alle na waxaad falaysaan wuu arkaa.

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَهَاجَرُواْ وَجَٰهَدُواْ بِأَمۡوَٰلِهِمۡ وَأَنفُسِهِمۡ فِي سَبِيلِ ٱللَّهِ وَٱلَّذِينَ ءَاوَواْ وَّنَصَرُوٓاْ أُوْلَٰٓئِكَ بَعۡضُهُمۡ أَوۡلِيَآءُ بَعۡضٖۚ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَلَمۡ يُهَاجِرُواْ مَا لَكُم مِّن وَلَٰيَتِهِم مِّن شَيۡءٍ حَتَّىٰ يُهَاجِرُواْۚ وَإِنِ ٱسۡتَنصَرُوكُمۡ فِي ٱلدِّينِ فَعَلَيۡكُمُ ٱلنَّصۡرُ إِلَّا عَلَىٰ قَوۡمِۭ بَيۡنَكُمۡ وَبَيۡنَهُم مِّيثَٰقٞۗ وَٱللَّهُ بِمَا تَعۡمَلُونَ بَصِيرٞ ٧٢

Dagaalkii Badar ee waynaa waxaa lagu qafaashay gaalo badan iyo dad la soo qasbay, ciddii toosnaata oo ka midana Alle wuxuu siin wax ka khayr roon wixii laga qaaday una dambi dhaafi, haddayse Nabiga khayaamaan horay Alle u khayaameen markaas muslimiinta gacanta u galiyey, illeen waa wax walba oge falsane. Tan kale ciddii rumaysay xaqa oo hijrootay oo xoolaheeda iyo nafteedaba ugu jahaadday jidka Alle, iyo kuwii soo dhaweeyey una gargaaray qaarkood qaarbuu sokeeye u yahay, kuwaanse saas falin waxba kama dhaxeeyo intay ka falaan, haddayse gargaar idin warsadaan waa looga gargaari ciddaan ballan lala dhigan. **[Al-Anfaal: 70-72].**

73. Kuwa gaaloobay qaarkood waa sokeeyaha qaar, haddaydaan saas falinna (ogaanna) fidmaa ahaan dhulka iyo fasaad wayn.

وَٱلَّذِينَ كَفَرُواْ بَعۡضُهُمۡ أَوۡلِيَآءُ بَعۡضٍۚ إِلَّا تَفۡعَلُوهُ تَكُن فِتۡنَةٞ فِي ٱلۡأَرۡضِ وَفَسَادٞ كَبِيرٞ ٧٣

74. Kuwa rumeeyey ee hijrooday ee ku jahaaday jidka Alle iyo kuwa soo dhaweeyey una gargaaray kuwaasu iyagaa mu'miniinta dhaba ah, waxayna mudan dambi dhaafid iyo rizqi sharafle.

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَهَاجَرُواْ وَجَٰهَدُواْ فِي سَبِيلِ ٱللَّهِ وَٱلَّذِينَ ءَاوَواْ وَّنَصَرُوٓاْ أُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلۡمُؤۡمِنُونَ حَقّٗاۚ لَّهُم مَّغۡفِرَةٞ وَرِزۡقٞ كَرِيمٞ ٧٤

75. Kuwa rumeeya gadaal oo hijrooda oo jahaada la jirkiinna kuwaasu waa idinka mid, qaraabadaana qaarkeed qaar ka mudan yahay xukunka Alle (oo muslinka kale ka horreeya xagga dhaxalka), Ilaahayna waxkasta waa og yahay.

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ مِنۢ بَعۡدُ وَهَاجَرُواْ وَجَٰهَدُواْ مَعَكُمۡ فَأُوْلَٰٓئِكَ مِنكُمۡۚ وَأُوْلُواْ ٱلۡأَرۡحَامِ بَعۡضُهُمۡ أَوۡلَىٰ بِبَعۡضٖ فِي كِتَٰبِ ٱللَّهِۗ إِنَّ ٱللَّهَ بِكُلِّ شَيۡءٍ عَلِيمُۢ ٧٥

Waa in la ogaado in muslimiintuna walaalo yihiin, gaaladuna isu kaalmaystaan colnimada xaqa iyo diinta islaamka, haddii kale waxaa dhici fidmo iyo fasaad wayn, kuwa xaqa rumeeyase oo hijrooda kuna jahaada jidka Alle iyo kuwa soo dhaweeya una gargaara kuwaasu waa mu'miniinta xaqa ah ee dhabta ah dambi dhaafid iyo wanaagna way mudan. Kuwa dib ka rumeeya oo hijrooda oo jahaada la jirkiinna waa idinka mid, qaraabadaase qaarkeed qaar ka mudan yahay kitaabka Alle, wax kastana Alle ayaa og. Waxay caddeeyeen aayaduhu abaalka wanaagsan ee mu'miintu mudan aakhiro. **[Al-Anfaal: 73-75].**

Suurat At-Tawbah

سُورَةُ التَّوۡبَةِ

بَرَآءَةٞ مِّنَ ٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦٓ إِلَى ٱلَّذِينَ عَٰهَدتُّم مِّنَ ٱلۡمُشۡرِكِينَ ١

1. Tani waa ka beri ahaasho Alle iyo Rasuulkiisu ay ka beri noqonayaan kuwaad la ballanteen oo mushrikiinta (gaalada) ah.

فَسِيحُواْ فِي ٱلۡأَرۡضِ أَرۡبَعَةَ أَشۡهُرٖ وَٱعۡلَمُوٓاْ أَنَّكُمۡ غَيۡرُ مُعۡجِزِي ٱللَّهِ وَأَنَّ ٱللَّهَ مُخۡزِي ٱلۡكَٰفِرِينَ ٢

2. Ee socda dhulka afar bilood ogaadana inaydaan daalinayn Alle iyo in Alle uu dulleyn gaalada.

وَأَذَٰنٞ مِّنَ ٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦٓ إِلَى ٱلنَّاسِ يَوۡمَ ٱلۡحَجِّ ٱلۡأَكۡبَرِ أَنَّ ٱللَّهَ بَرِيٓءٞ مِّنَ ٱلۡمُشۡرِكِينَ وَرَسُولُهُۥۚ فَإِن تُبۡتُمۡ فَهُوَ خَيۡرٞ لَّكُمۡۖ وَإِن تَوَلَّيۡتُمۡ فَٱعۡلَمُوٓاْ أَنَّكُمۡ غَيۡرُ مُعۡجِزِي ٱللَّهِۗ وَبَشِّرِ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ بِعَذَابٍ أَلِيمٍ ٣

3. Waana ogaysiin Alle ka ahaatay iyo Rasuulkiisa oo dadka maalinta xajka wayn la ogeysiin in Alle ka bari yahay gaalada iyo Rasuulkiisu, haddaad toobadkeentaanna saasaa idiin khayr roon, haddaad jeedsataanna ogaada inaydaan Alle daalinayn, uguna bishaareeya kuwii gaaloobay cadaab daran.

إِلَّا ٱلَّذِينَ عَٰهَدتُّم مِّنَ ٱلۡمُشۡرِكِينَ ثُمَّ لَمۡ يَنقُصُوكُمۡ شَيۡـٔٗا وَلَمۡ يُظَٰهِرُواْ عَلَيۡكُمۡ أَحَدٗا فَأَتِمُّوٓاْ إِلَيۡهِمۡ عَهۡدَهُمۡ إِلَىٰ مُدَّتِهِمۡۚ إِنَّ ٱللَّهَ يُحِبُّ ٱلۡمُتَّقِينَ ٤

4. Kuwaad ballanteen mooyee oo gaalada ah markaasna aan idinka nusqaaminin waxba, idiinkuna kaalmaynin cidna, ee dhammeeya tan iyo ballankooda «muddadooda», Alle na wuxuu jecel yahay kuwa dhawrsada.

Suuraddani waxay ka mid tahay suuradaha ugu dambeeyey soo degid, illeen xaggeeda hore waxay soo degeen markii laga soo noqday duullaankii Tabuuk, bisinna laguma billaabin suuradda, waxayna caddeyn in Alle iyo Rasuulkiisu ka bari yihiin gaalo, kuwii ballan lala dhigtayna uu u jiro muddo afar bilooda, saasaana la ogaysiiyey maalintii iiddii carrafo, cid ballan leh oon jabin mooyee, colna ugu kaalmaynin muslimiinta waxaana la sugi mudadooda, taasina waxay ku tusin sida islaamku ballanka u dhawro una ilaaliyo iyo inaan Alle iyo Rasuulkiisa iyo gaalo wanaag dhex oollin. **[At-Tawbah: 1-4].**

5. Markay faydmaan bilaha xurmada leh ku dila gaalada meeshaad ka heshaan qabtana (qafaasha) go'doomiya una fadhiista meel gabbasho ah oo dhan, haddayse toobad keenaan oogaanna salaadda, bixiyaanna sakada u sii daaya jidkooda, Alle waa dambi dhaafe naxariistee.

فَإِذَا ٱنسَلَخَ ٱلْأَشْهُرُ ٱلْحُرُمُ فَٱقْتُلُوا۟ ٱلْمُشْرِكِينَ حَيْثُ وَجَدتُّمُوهُمْ وَخُذُوهُمْ وَٱحْصُرُوهُمْ وَٱقْعُدُوا۟ لَهُمْ كُلَّ مَرْصَدٍ ۚ فَإِن تَابُوا۟ وَأَقَامُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ وَءَاتَوُا۟ ٱلزَّكَوٰةَ فَخَلُّوا۟ سَبِيلَهُمْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٥﴾

6. Mid ka mida gaaladana hadduu magangal idin waydiisto magangaliya intuu ka maqlo hadalka Alle markaas gaadhsiiya meeluu aamin ku yahay, illeen waa qoom aan wax ogayne.

وَإِنْ أَحَدٌ مِّنَ ٱلْمُشْرِكِينَ ٱسْتَجَارَكَ فَأَجِرْهُ حَتَّىٰ يَسْمَعَ كَلَٰمَ ٱللَّهِ ثُمَّ أَبْلِغْهُ مَأْمَنَهُۥ ۚ ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ قَوْمٌ لَّا يَعْلَمُونَ ﴿٦﴾

7. Siday ugu ahaan gaalada ballan Alle agtiisa iyo Rasuulkiisa agtiisa kuwaad kula ballanteen masaajidka xurmada leh agtiisa mooyee ee hadday idiin toosnaadaan u toosanaada, Alle wuxuu jecel yahay kuwa dhawrsadee.

كَيْفَ يَكُونُ لِلْمُشْرِكِينَ عَهْدٌ عِندَ ٱللَّهِ وَعِندَ رَسُولِهِۦٓ إِلَّا ٱلَّذِينَ عَٰهَدتُّمْ عِندَ ٱلْمَسْجِدِ ٱلْحَرَامِ ۖ فَمَا ٱسْتَقَٰمُوا۟ لَكُمْ فَٱسْتَقِيمُوا۟ لَهُمْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ يُحِبُّ ٱلْمُتَّقِينَ ﴿٧﴾

Markay baxaan bilaha xurmada leh waxaa bannaan in la laayo gaalada meel kastoo laga helo oo la qafaasho lana qabto meel kastana loo fadhiisto, haddayse toobad keenaan oo salaadda oogaan oo bixiyaan sakada waxaa loo sii dayn jidkooda, illeen Alle waa dambi dhaafe naxariiste, haddii cid gaalada ka mid ah nabadgalin warsadaan muslimiinta ha la nabadgaliyo intay ka dhagaystaan hadalka Alle, markaas la gaadhsiiyo meeshay aaminka ku yihiin

illeen waa kuwaan wax ogayn, siduu Nabigu falay (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) sanadkii Xudaybiyo, iyo marar kale oo sabab u noqotay hanuunkooda, tan kale gaaladu ballan kuma laha Alle iyo Rasuulkiisa agtiisa, kuwii lagula ballamay masaajidka xurmada leh agtiisa mooyee, waana in loo toosnaado intay toosan yihiin, Alle na wuxuu jecel yahay kuwa dhawrsada, Nabiguna saasuu falay muslimiintuna faleen mana bannaana in ballan la jabiyo. **[At-Tawbah: 5-7].**

كَيْفَ وَإِن يَظْهَرُوا۟ عَلَيْكُمْ لَا يَرْقُبُوا۟
فِيكُمْ إِلًّا وَلَا ذِمَّةً ۚ يُرْضُونَكُم
بِأَفْوَٰهِهِمْ وَتَأْبَىٰ قُلُوبُهُمْ وَأَكْثَرُهُمْ
فَٰسِقُونَ ﴿٨﴾

8. Sidee (ballan ugu sugnaanayaa) iyadoo hadday idinka adkaadaan ayna idiin dhawrayn qaraabannimo iyo ballan midna, waxay idinku raalli galin afkooda wayna diidi quluubtoodu, badankooduna waa faasiqiin.

ٱشْتَرَوْا۟ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ ثَمَنًا قَلِيلًا فَصَدُّوا۟
عَن سَبِيلِهِۦٓ ۚ إِنَّهُمْ سَآءَ مَا كَانُوا۟
يَعْمَلُونَ ﴿٩﴾

9. Waxay ku gataan aayaadka Alle qiimo yar, waxayna ka leexiyeen jidka Alle, waxaana xun waxay falayeen.

لَا يَرْقُبُونَ فِى مُؤْمِنٍ إِلًّا وَلَا ذِمَّةً ۚ
وَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْمُعْتَدُونَ ﴿١٠﴾

10. Umana dhawraan mu'min qaraabonimo iyo ballan (midna) kuwaasuna waa uun xadgudbayaal.

فَإِن تَابُوا۟ وَأَقَامُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ وَءَاتَوُا۟ ٱلزَّكَوٰةَ
فَإِخْوَٰنُكُمْ فِى ٱلدِّينِ ۗ وَنُفَصِّلُ ٱلْـَٔايَٰتِ
لِقَوْمٍ يَعْلَمُونَ ﴿١١﴾

11. Haddayse toobadkeenaan oo oogaan salaadda bixiyaanna sakada waa walaalihiinna diinta waana u caddaynaynaa aayaadka qoomkii wax garan.

وَإِن نَّكَثُوٓا۟ أَيْمَٰنَهُم مِّنۢ بَعْدِ عَهْدِهِمْ
وَطَعَنُوا۟ فِى دِينِكُمْ فَقَٰتِلُوٓا۟ أَئِمَّةَ
ٱلْكُفْرِ ۙ إِنَّهُمْ لَآ أَيْمَٰنَ لَهُمْ لَعَلَّهُمْ
يَنتَهُونَ ﴿١٢﴾

12. Haddayse buriyaan dhaartooda ballankoodii ka dib, duraanna diintiinna dila madaxda gaalada waa kuwaan dhaar lahayne inay ka joogaan (xumaanta).

Gaaladu ma dhawraan muslimiinta hadday ka tabar roonaadaan ugumana naxariistaan qaraabannimo iyo ballan midna, iyagoo afkana isku dayi inay ku raalli galiyaan muslimiinta, qalbigooduna diidi oo faasiqiinna ah, kuna gatay aayaadka Alle qiimo yar, jidkiisana ka leexiya dadka, wax xunna fala,

cid mu'minana aan u dhawrayn qaraabo iyo ballan iyagoo xadgudbi, haddayse toobadkeenaan oo salaadda oogaan oo sakada bixiyaan, waa walaalihiinna diinta, aayaadkana wuxuu Alle u caddeeyey cidii wax garan, haddayse buriyaan dhaartooda ballan kadib duraanna diintiinna waa in la laayo madaxda gaalada dadka fari xumaanta xaqdiidka iyo gaalnimadana ku hagaajin, waa kuwaan ballan iyo dhaar lahayne bal inay xumaanta ka joogaan, saasayna u muuqataa wadada islaamku oon qarsoodi iyo qalqallooc midna ugu jirin, ciddii kula nabaddana la nabad tii diidda xaqa oo burisa ballankana iska celiya kana digtoonaada. **[At-Tawbah: 8-12].**

أَلَا تُقَٰتِلُونَ قَوْمًا نَّكَثُوٓاْ أَيْمَٰنَهُمْ وَهَمُّواْ بِإِخْرَاجِ ٱلرَّسُولِ وَهُم بَدَءُوكُمْ أَوَّلَ مَرَّةٍ ۚ أَتَخْشَوْنَهُمْ ۚ فَٱللَّهُ أَحَقُّ أَن تَخْشَوْهُ إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ﴿١٣﴾

13. Miyeydaan la dagaallamayn qoom buriyey dhaartooda oo hammiyey (doonay) bixinta Rasuulka idinkuna billaabay markii horaba, miyaad ka cabsanaysaan, Alle ayaa mudan inaad ka cabsataan haddaad mu'miniin tihiin.

قَٰتِلُوهُمْ يُعَذِّبْهُمُ ٱللَّهُ بِأَيْدِيكُمْ وَيُخْزِهِمْ وَيَنصُرْكُمْ عَلَيْهِمْ وَيَشْفِ صُدُورَ قَوْمٍ مُّؤْمِنِينَ ﴿١٤﴾

14. La dagaallama, Alle ha ku cadaabo gacmihiinnee hana dulleeyee hana idinkaga gargaaree oo bogsiiyo laabta qoom mu'miniina.

وَيُذْهِبْ غَيْظَ قُلُوبِهِمْ ۗ وَيَتُوبُ ٱللَّهُ عَلَىٰ مَن يَشَآءُ ۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿١٥﴾

15. Tegsiiyana cadhada quluubtooda, wuxuuna ka toobad aqbalaa Alle cidduu doono, Alle na waa oge falsan.

أَمْ حَسِبْتُمْ أَن تُتْرَكُواْ وَلَمَّا يَعْلَمِ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ جَٰهَدُواْ مِنكُمْ وَلَمْ يَتَّخِذُواْ مِن دُونِ ٱللَّهِ وَلَا رَسُولِهِۦ وَلَا ٱلْمُؤْمِنِينَ وَلِيجَةً ۚ وَٱللَّهُ خَبِيرٌۢ بِمَا تَعْمَلُونَ ﴿١٦﴾

16. Ma waxaad u malayseen in laydinka tegi isagoon Alle ogaannin kuwa jahaaday oo idinka mida oon ka yeelannin wax ka soo hadhay Alle iyo Rasuulkiisa iyo mu'miniinta saaxiib, Alle na waa og yahay waxaad falaysaan.

Aayaduhu waxay ku adkayn muslimiinta inay la dagaalamaan gaalada burin ballanka oo ahaa kuwii bixinta Rasuulka hammiyey doonayna, xumaanna billaabay, wax laga cabsadana ma aha ee Ilaahay yaa ka cabsi mudan, waana

in kuwaas lala dagaallamo, lana dulleeyo, Alle na ugu gargaaro mu'miniinta, quluubtoodana u caafiyo, cadhadana ka tegsiiyo, cidduu doonana uu ka aqbalo toobada, illeen waa oge falsane. Imitixaan la'aanna mu'miniinta lagu dayn maayo inta Alle ka ogaado kuwa jahaaday oon gaalo saaxiib ka yeelan intay Alle, Rasuulkiisa iyo mu'miniinta ka leexdaan, Allese waa og yahay waxay fali, wuuna ka abaal marin.

Aayaduhu waxay ku uruursadeen in gaalo colka muslimiinta tahay oyna waajib tahay in lala jahaado intay xaqa ka soo horjeedaan lagana dhigannin saaxiib sokeeye iyo gargaare midna, illeen waa cole. **[At-Tawbah: 13-16].**

مَا كَانَ لِلْمُشْرِكِينَ أَن يَعْمُرُواْ مَسَٰجِدَ ٱللَّهِ شَٰهِدِينَ عَلَىٰٓ أَنفُسِهِم بِٱلْكُفْرِ ۚ أُوْلَٰٓئِكَ حَبِطَتْ أَعْمَٰلُهُمْ وَفِى ٱلنَّارِ هُمْ خَٰلِدُونَ ﴿١٧﴾

17. Uma bannaana gaalada inay cammiraan masaajidda Alle iyagoo ku qiri naftooda gaalnimo kuwaas waxaa buray camalkoodii naartana way ku dhex waari.

إِنَّمَا يَعْمُرُ مَسَٰجِدَ ٱللَّهِ مَنْ ءَامَنَ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ وَأَقَامَ ٱلصَّلَوٰةَ وَءَاتَى ٱلزَّكَوٰةَ وَلَمْ يَخْشَ إِلَّا ٱللَّهَ ۖ فَعَسَىٰٓ أُوْلَٰٓئِكَ أَن يَكُونُواْ مِنَ ٱلْمُهْتَدِينَ ﴿١٨﴾

18. Waxaa uun cammira masaajidda Alle cid rumaysay Alle iyo maalinta dambe oo salaadda ooga oo bixiya sakada, kana cabsanayn waxaan Alle ahayn, waxay u dhaw yihiin kuwaas inay ka mid noqdaan kuwa hanuunsan.

أَجَعَلْتُمْ سِقَايَةَ ٱلْحَآجِّ وَعِمَارَةَ ٱلْمَسْجِدِ ٱلْحَرَامِ كَمَنْ ءَامَنَ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ وَجَٰهَدَ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ ۚ لَا يَسْتَوُۥنَ عِندَ ٱللَّهِ ۗ وَٱللَّهُ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿١٩﴾

19. Ma waxaad kala mid dhigteen waraabinta xaajiga iyo camiridda masaajidka xurmaysan ruux rumeeyey Alle iyo maalinta dambe oo ku jahaaday jidka Alle, kuma sinna Alle agtiisa, Alle na ma hanuuniyo qoomka daalimiinta ah.

ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَهَاجَرُواْ وَجَٰهَدُواْ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ بِأَمْوَٰلِهِمْ وَأَنفُسِهِمْ أَعْظَمُ دَرَجَةً عِندَ ٱللَّهِ ۚ وَأُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْفَآئِزُونَ ﴿٢٠﴾

20. Kuwa rumeeyey (xaqa) oo hijrooday oo ku jahaaday jidka Alle xoolahooda iyo naftooda, yaa ku darajo wayn Alle agtiisa, kuwaasina waa kuwa uun liibaanay.

21. Wuxuu ugu bishaarayn Rabbigood naxariis xaggiisa ah, raalli ahaansho iyo jannooyin oy ku mudan dhexdeeda nicmo nagaadi ah «joogto».

يُبَشِّرُهُمْ رَبُّهُم بِرَحْمَةٍ مِّنْهُ وَرِضْوَٰنٍ وَجَنَّٰتٍ لَّهُمْ فِيهَا نَعِيمٌ مُّقِيمٌ ﴿٢١﴾

22. Iyagoo ku waari dhexdeeda waligood Alle agtiisaana ajir wayn yahay.

خَٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدًا ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عِندَهُۥٓ أَجْرٌ عَظِيمٌ ﴿٢٢﴾

Gaalo xaq uma leh inay cammiraan oo dhisaan ama ku nagaadaan masaajidda Alle illeen waaba gaalee, camalkooduna wuu buri, naarna way ku waari, waxaase cammira masaajidda Alle mu'miniinta hanuunsan, isku midna ma aha cid xaqa dhammaan rumaysay iyo gaaladii Makaad ee waraabin jiray xujaajta, masaajidkana cammiri jiray, waxbase uma tarin, waxaase liibaani oo janno ku waari kuwa rumeeya xaqa, oo hijrooday oo jahaada, waana kaas jidka xaqa ah ee toosan ee wax tara qiimana leh. Waxaa jirtay in dad ku faaneen inay cammiri masaajidka xurmaysan iyo waraabinta xujaajta iyo wax la mida, markaasaa waxaa soo dagay aayaddan caddeyn mu'minka dhabta ah ee liibaanay. **[At-Tawbah: 17-22].**

23. Kuwa (xaqa) rumeeyow ha ka yeelannina aabayaalkiin iyo walaalihiin sokeeye hadday ka jeclaadaan gaalnimada iimaanka, ciddiise ka sokeeye yeelata oo idinka mida kuwaasu iyaga umbaa daalimiina.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تَتَّخِذُوٓا۟ ءَابَآءَكُمْ وَإِخْوَٰنَكُمْ أَوْلِيَآءَ إِنِ ٱسْتَحَبُّوا۟ ٱلْكُفْرَ عَلَى ٱلْإِيمَٰنِ ۚ وَمَن يَتَوَلَّهُم مِّنكُمْ فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلظَّٰلِمُونَ ﴿٢٣﴾

24. Waxaad dhahdaa haddaad aabayaalkiin, carruurtiinna, walaalihiin, haweenkiinna, qaraabadiinna, xoolo aad kasbateen, ganacsi aad ka cabsanaysaan inuu baaro iyo guryo aad ka raalli tihiin ka jeceshihiin Ilaahay, Rasuulkiisa iyo jahaad jidkiisa, suga inta Alle ka keeni amarkiisa, Alle na ma hanuuniyo qoomka faasiqiinta ah.

قُلْ إِن كَانَ ءَابَآؤُكُمْ وَأَبْنَآؤُكُمْ وَإِخْوَٰنُكُمْ وَأَزْوَٰجُكُمْ وَعَشِيرَتُكُمْ وَأَمْوَٰلٌ ٱقْتَرَفْتُمُوهَا وَتِجَٰرَةٌ تَخْشَوْنَ كَسَادَهَا وَمَسَٰكِنُ تَرْضَوْنَهَآ أَحَبَّ إِلَيْكُم مِّنَ ٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ وَجِهَادٍ فِى سَبِيلِهِۦ فَتَرَبَّصُوا۟ حَتَّىٰ يَأْتِىَ ٱللَّهُ بِأَمْرِهِۦ ۗ وَٱللَّهُ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلْفَٰسِقِينَ ﴿٢٤﴾

25. Wuxuu idiinku gargaaray Alle meelo badan, iyo maalintii Xunayn markay idin cajabisay badnidiinnii oona waxba idiin tarin dhulkuna idinku cidhiidhyamay isagoo waasaca markaas aad jeedsateen idinkoo carari.

لَقَدْ نَصَرَكُمُ ٱللَّهُ فِى مَوَاطِنَ كَثِيرَةٍ
وَيَوْمَ حُنَيْنٍ إِذْ أَعْجَبَتْكُمْ كَثْرَتُكُمْ
فَلَمْ تُغْنِ عَنكُمْ شَيْـًٔا وَضَاقَتْ
عَلَيْكُمُ ٱلْأَرْضُ بِمَا رَحُبَتْ ثُمَّ وَلَّيْتُم
مُّدْبِرِينَ ﴿٢٥﴾

26. Markaas Alle ku soo dajiyey xasilkiisii Rasuulkiisii iyo mu'miniintii kuna soo dejiyey junuud aydaan arkayn, uuna cadaabay kuwii gaaloobay, taasina waa abaalka gaalada.

ثُمَّ أَنزَلَ ٱللَّهُ سَكِينَتَهُۥ عَلَىٰ رَسُولِهِۦ
وَعَلَى ٱلْمُؤْمِنِينَ وَأَنزَلَ جُنُودًا لَّمْ تَرَوْهَا
وَعَذَّبَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ ۚ وَذَٰلِكَ جَزَآءُ
ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٢٦﴾

27. Markaas Alle ka toobad aqbalo intaas ka dib cidduu doono, Alle na waa dambi dhaafe naxariista.

ثُمَّ يَتُوبُ ٱللَّهُ مِنۢ بَعْدِ ذَٰلِكَ عَلَىٰ مَن
يَشَآءُ ۗ وَٱللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٢٧﴾

Alle wuxuu ku reebi aayadaha hore in qaraabo laga yeesho cid gaalnimo xaqa ka dooratay ama aabbo ha ahaato ama walaal iyo wax la mida, ciddiise qaraabadiisa, xoolihiisa, ganacsigiisa iyo guryihiisa ka doorta xaqa iyo jahaadka ha sugo balaayo iyo ciqaab, illeen faasiq buu noqdaye. Waxaana waajiba in Alle, diinta islaamka ah iyo Rasuulka Muxamada, loo jeclaado si daran, wax kastana laga jeclaado sida xadiith ku sugnaatay. Aayadaha kale waxay caddayn in muslimiinta wax badan Alle u gargaaray, gaar ahaan maalintii Xunayn oo muslimiintu la yaabeen badnidooda markaas ay carareen Nabiga iyo in la jirtay mooyee, markaas Alle xoojiyey si fiicanna u dagaallameen gaaladiina jabiyey, cidduu doonana ka toobad aqbalay, waana dagaalkii Xuneyn ee Maka iyo Dhaa'if dhexdooda lala galay qoomkii Hawaasin, taasina waxay ku tusi inayna badni waxba tarayn mar haddaan Alle gargaarkiisu jirin laguna xidhnayn, illeen maalintii Badar oo la yaraana waa kii markiiba gaaladii badnayd la jabiyey, maalintii Xuneynna ee la badnaana markii hore la jabay markaas Alle u gargaaray. **[At-Tawbah: 23-27].**

28. Kuwa xaqa rumeeyow mushrikiintu (gaalada) waa nijaas ee yeyna masaajidka xurmaysan u dhawaannin sanadkan ka dib, haddaad ka cabsataan

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ إِنَّمَا ٱلْمُشْرِكُونَ
نَجَسٌ فَلَا يَقْرَبُوا۟ ٱلْمَسْجِدَ ٱلْحَرَامَ بَعْدَ
عَامِهِمْ هَٰذَا ۚ وَإِنْ خِفْتُمْ عَيْلَةً فَسَوْفَ

saboolnimana wuxuu idinku hodmin Alle fadligiisa hadduu doono, illeen waa oge falsane.

يُغْنِيكُمُ ٱللَّهُ مِن فَضْلِهِۦٓ إِن شَآءَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿٢٨﴾

29. La dagaallama kuwaan rumeyn Alle iyo maalinta aakhiro oon xaaraan yeelayn wuxuu reebay Alle iyo Rasuulkiisu, ka diin dhiganayn diinta xaqa ah (islaamka) oo ah kuwa ehelu kitaabka ah yuhuud iyo nasaarada intay ka dhiibaan jisyada (iyagoo gacantooda ku dhiibaaya) iyagoo dullaysan.

قَٰتِلُوا۟ ٱلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِٱللَّهِ وَلَا بِٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ وَلَا يُحَرِّمُونَ مَا حَرَّمَ ٱللَّهُ وَرَسُولُهُۥ وَلَا يَدِينُونَ دِينَ ٱلْحَقِّ مِنَ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْكِتَٰبَ حَتَّىٰ يُعْطُوا۟ ٱلْجِزْيَةَ عَن يَدٍ وَهُمْ صَٰغِرُونَ ﴿٢٩﴾

30. Waxay dhaheen yuhuud cusayr waa wiil Alle, nasaarana waxay tidhi Masiix (Ciise) waa wiil Alle, kaasina waa hadalkoodii oy afka ka sheegeen, waxay shabbahaan kuwii horey u gaaloobay hadalkoodii, Alle ha laayo (hana lacnado) ee xaggee loo leexin.

وَقَالَتِ ٱلْيَهُودُ عُزَيْرٌ ٱبْنُ ٱللَّهِ وَقَالَتِ ٱلنَّصَٰرَى ٱلْمَسِيحُ ٱبْنُ ٱللَّهِ ۖ ذَٰلِكَ قَوْلُهُم بِأَفْوَٰهِهِمْ ۖ يُضَٰهِـُٔونَ قَوْلَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مِن قَبْلُ ۚ قَٰتَلَهُمُ ٱللَّهُ ۖ أَنَّىٰ يُؤْفَكُونَ ﴿٣٠﴾

31. Waxay ka yeesheen culimadoodii iyo caabidiintoodii Rabbiyaal Ilaahay ka sokow iyo Ciise ibnu Maryama, waxaan cibaadada Ilaahay kali ah ahaynna lama farin, ku xaq lugu caabudo oon Allaah ahyan ma jiro, waana ka nasahan yahay waxay la wadaajin.

ٱتَّخَذُوٓا۟ أَحْبَارَهُمْ وَرُهْبَٰنَهُمْ أَرْبَابًا مِّن دُونِ ٱللَّهِ وَٱلْمَسِيحَ ٱبْنَ مَرْيَمَ وَمَآ أُمِرُوٓا۟ إِلَّا لِيَعْبُدُوٓا۟ إِلَٰهًا وَٰحِدًا ۖ لَّآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ۚ سُبْحَٰنَهُۥ عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿٣١﴾

Gaaladu waa nijaas mana bannaana inay masaajidda galaan una dhawaadan, waana in lala dagaallamo kuwa kitaabka sheegan intay xoolo jisya ah ay bixiyaan muslimiintana siiyaan dhawriddooda darteed, illeen waxay ka leexdeen diintii islaamka ee xaqa ahayde kamana joogaan waxa Alle iyo Rasuulkiisu reebeen, waana in kuwaas la xukumo lana ilaaliyo, kibir iyo isla waynina ayan kula noolaannin muslimiinta, aayadaha kale yuhuuddu waxay

cusayr ku sheegtay wiil Alle, nasaarana waxay Ciise ku sheegeen wiil Alle, waana hadalkii gaaladii ka horraysay oo kale, meel daran yaana loo leexiyey, waxayna Alle ka yeesheen wadaaddadoodii iyo Nabi Ciise iyadoo cibaadada Alle kaliya la faray, Cadiyi binu Xaatim yaa ku yidhi: maannaan caabudi jirin culimada, markaasuu yidhi Nabigu: waxay jideeyaan (oo ah xaaraan la xalaaleeyo, xalaal xaaraan laga dhigo) sow kumaydaan dhaqmayn, wuxuuna yidhi: haa, markaasuu yidhi: wataas cibaadadu. Sheekh Ibnu Taymiya wuxuu sheegay inay gaaloobayaan qoladii sax u aragta waxa lagu beddelay sharciga iyagoo og in sharciga la khilaafay. **[At-Tawbah: 28-31].**

يُرِيدُونَ أَن يُطْفِـُٔوا۟ نُورَ ٱللَّهِ بِأَفْوَٰهِهِمْ وَيَأْبَى ٱللَّهُ إِلَّآ أَن يُتِمَّ نُورَهُۥ وَلَوْ كَرِهَ ٱلْكَٰفِرُونَ ﴿٣٢﴾

32. Waxay dooni gaaladu inay ku damiyaan nuurka Alle afkooda, Alle na wuu diidi dhamaystirka nuurka moyee haba naceen gaaladuye.

هُوَ ٱلَّذِىٓ أَرْسَلَ رَسُولَهُۥ بِٱلْهُدَىٰ وَدِينِ ٱلْحَقِّ لِيُظْهِرَهُۥ عَلَى ٱلدِّينِ كُلِّهِۦ وَلَوْ كَرِهَ ٱلْمُشْرِكُونَ ﴿٣٣﴾

33. Alle waa kan ku diray rasuulkiisa hanuun iyo diin xaqa inuu ka kor mariyo diimaha dhammaan haba naceen gaaladuye.

۞ يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ إِنَّ كَثِيرًا مِّنَ ٱلْأَحْبَارِ وَٱلرُّهْبَانِ لَيَأْكُلُونَ أَمْوَٰلَ ٱلنَّاسِ بِٱلْبَٰطِلِ وَيَصُدُّونَ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ ۗ وَٱلَّذِينَ يَكْنِزُونَ ٱلذَّهَبَ وَٱلْفِضَّةَ وَلَا يُنفِقُونَهَا فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ فَبَشِّرْهُم بِعَذَابٍ أَلِيمٍ ﴿٣٤﴾

34. Kuwa xaqa rumeeyow wax badan oo ka mida axbaarta (culimada yuhuud) iyo ruhbaantu (culimada nasaarada) waxay ku cunaan xoolaha dadka xaq darro, waxayna ka celiyaan (dadka xaqa), kuwa kaydsada dahabka iyo fiddada oon ku bixinayn jidka Alle (zakada) ugu bishaaree cadaab daran.

يَوْمَ يُحْمَىٰ عَلَيْهَا فِى نَارِ جَهَنَّمَ فَتُكْوَىٰ بِهَا جِبَاهُهُمْ وَجُنُوبُهُمْ وَظُهُورُهُمْ ۖ هَٰذَا مَا كَنَزْتُمْ لِأَنفُسِكُمْ فَذُوقُوا۟ مَا كُنتُمْ تَكْنِزُونَ ﴿٣٥﴾

35. Maalinta xoolahaas lagu shidi naarta jahannamo ay ku guban wajiyadoodu iyo dhinacyadoodu iyo dhabarkoodu, oo lagu odhan: kani waa waxaad u kaydsanayseen naftiinna ee dhadhamiya waxaad kaydsanayseen ciqaabtiisa.

Culimada xun waa balaayo dadka ku dhex jirta sida culimadii yuhuud iyo nasaara oo been iyo xaqdarro ku cunayey xoolaha dadka, ciddii sidooda fashana wuxuu qaaday jidkoodii, tan kale ciddii Alle xoola siiyey oon xaqa ku bixinnin ee kulmiya uun oo uruuriya wuxuu mudan in xoolihii lagu gubo lagagana shido meel kasta isagoo lagu dhihi dhadhami waxaad kaydsatay ciqaabtiisa, xoolahaan sakada iyo xaqa Alle laga bixinninna waa kayd naareed, aayadaha horena waxay caddeyn in gaaladu dooni inay xaqa iyo nuurka Alle damiyaan kuna qariyaan xumaan iyo baadil, Alle ayaase diray Rasuulka oo hanuun wata iyo diinta islaamka ee xaqa ah, Alle ayaana dhamaystiri oo diimaha ka kormarin haba naceen gaaladuye.

Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: diintu waxay gaadhi meeshey habeen iyo maalin joogaan, waxayna gali guri kasto. Taasina waa bishaaro caddeyn caalaminnimada diinta islaamka iyo say u faafi. **[At-Tawbah: 32-35].**

إِنَّ عِدَّةَ ٱلشُّهُورِ عِندَ ٱللَّهِ ٱثْنَا
عَشَرَ شَهْرًا فِى كِتَٰبِ ٱللَّهِ يَوْمَ خَلَقَ
ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ مِنْهَآ أَرْبَعَةٌ حُرُمٌ ۚ
ذَٰلِكَ ٱلدِّينُ ٱلْقَيِّمُ ۚ فَلَا تَظْلِمُوا۟ فِيهِنَّ
أَنفُسَكُمْ ۚ وَقَٰتِلُوا۟ ٱلْمُشْرِكِينَ كَآفَّةً
كَمَا يُقَٰتِلُونَكُمْ كَآفَّةً ۚ وَٱعْلَمُوٓا۟ أَنَّ
ٱللَّهَ مَعَ ٱلْمُتَّقِينَ ﴿٣٦﴾

36. Tirada bilaha Alle agtiisa waa labiyo toban kitaabka Alle dhexdiisa taniyo maalintuu abuuray samooyinka iyo dhulka, waxaana ka mid ah afar xurmo (gaara) leh waana taas diinta toosan ee ha dulmiyina dhexdooda naftiinna, lana dagaallama gaalada dhammaantiin, siday idiinla dagaalamayaan dhammaan, ogaadana in Alle la jiro kuwa dhawrsada.

إِنَّمَا ٱلنَّسِىٓءُ زِيَادَةٌ فِى ٱلْكُفْرِ ۖ يُضَلُّ
بِهِ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ يُحِلُّونَهُۥ عَامًا
وَيُحَرِّمُونَهُۥ عَامًا لِّيُوَاطِـُٔوا۟ عِدَّةَ مَا
حَرَّمَ ٱللَّهُ فَيُحِلُّوا۟ مَا حَرَّمَ ٱللَّهُ ۚ زُيِّنَ
لَهُمْ سُوٓءُ أَعْمَٰلِهِمْ ۗ وَٱللَّهُ لَا يَهْدِى
ٱلْقَوْمَ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٣٧﴾

37. Dib u dhigidda (bilo) waa uun badsasho gaalnimo laguna baadiyeeyo kuwa gaaloobay, waxay banneeyaan sanad waxayna reebaan mid inay waafaqaan tirada Alle reebay oyna banneeyaan wax Alle reebay, waxaa loo qurxiyey camalkoodii xumaa, Alle na ma hanuuniyo qoomka gaalada ah.

Waxaa jirtay in gaaladu bilaha sanadka say rabaan u qaybin jireen oo mar soo hormarin jireen marna dib u dhigi jireen markaasaa Alle ku caddeeyey aayadda in biluhu yihiin labiyo toban, afar si gaar ah loo dhawrana ka mid yihiin waana: sidataal, arafo, saka, iyo rajab oyna xun tahay in lays dulmiyo, tan kale waa in gaalada dhammaan lala dagaallamo siday iyaba dhammaan ula dagaalami muslimiinta, Alle na wuxuu la jiraa muslimiinta dhawrsada ee dhabta ah, in kastoo dulmigu goor walba xun yahay haddana bilahaas waa ka sii daran yahay, saas darteed dib u dhigga bil ama horumarinteedu waa uun kordhisasho gaalnimo, waxaana halkaas ka muuqda in ay xalaal tahay wuxuu Alle banneeyey, xaaraanna tahay wuxuu Alle reebay, xaaranna yahay wuxuu Rasuulku reebo ciddii wax Alle reebay bannaysa ama wax Alle banneeyey reebta waa mid Ilaahay is bar bardhigtay oo dhuntay xaqana ka leexatay. **[At-Tawbah: 36-37].**

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ مَا لَكُمْ إِذَا قِيلَ لَكُمُ ٱنفِرُوا۟ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ ٱثَّاقَلْتُمْ إِلَى ٱلْأَرْضِ ۚ أَرَضِيتُم بِٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا مِنَ ٱلْـَٔاخِرَةِ ۚ فَمَا مَتَـٰعُ ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا فِى ٱلْـَٔاخِرَةِ إِلَّا قَلِيلٌ ﴿٣٨﴾

38. Kuwa xaqa rumeeyow maxaad leedihiin oo marka laydin dhaho ku baxa jidka Alle aad ugu cuslaataan dhulka, ma waxaad ku raalli noqotaan nolosha adduun aakhiro ka sokow, nolosha adduunyo marka aakharo loo dayo waa uun raaxo yar.

إِلَّا تَنفِرُوا۟ يُعَذِّبْكُمْ عَذَابًا أَلِيمًا وَيَسْتَبْدِلْ قَوْمًا غَيْرَكُمْ وَلَا تَضُرُّوهُ شَيْـًٔا ۗ وَٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿٣٩﴾

39. Haddaydaan bixin wuxuu Alle idin cadaabi cadaab daran, wuxuuna idinku badali qoom aan idinka ahayn, waxna kama dhibaysaan Alle, Alle wax kasta waa karaa.

إِلَّا تَنصُرُوهُ فَقَدْ نَصَرَهُ ٱللَّهُ إِذْ أَخْرَجَهُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ ثَانِىَ ٱثْنَيْنِ إِذْ هُمَا فِى ٱلْغَارِ إِذْ يَقُولُ لِصَـٰحِبِهِۦ لَا تَحْزَنْ إِنَّ ٱللَّهَ مَعَنَا ۖ فَأَنزَلَ ٱللَّهُ سَكِينَتَهُۥ عَلَيْهِ وَأَيَّدَهُۥ بِجُنُودٍ لَّمْ تَرَوْهَا وَجَعَلَ كَلِمَةَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ ٱلسُّفْلَىٰ ۗ وَكَلِمَةُ ٱللَّهِ هِىَ ٱلْعُلْيَا ۗ وَٱللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٤٠﴾

40. Haddaydaan u gargaarin Nabiga waxaa u gargaaray Alle markay bixiyeen kuwii gaaloobay isagoo labo midkooda markay godka ku jireen markuu ku lahaa saaxiibkiis ha walbahaarin Alle ayaa inala jiree, oo Alle ku dajiyey xasilkiisa kuna xoojiyey junuud aydaan arkayn kana yeelay kalimadda kuwa

gaaloobay tan hoosaysa, kalimadda Ilaahayna waa tan sarreysa, Alle na waa adkaade falsan.

Jahaadku waa waajib mana habboona in marka jahaadku joogo la dib maro oon la bixin, lana doorto nolosha iyo raaxada adduunka, raaxada adduunse waa wax yar oo dhammaan, haddaan jahaadka loo bixinna Alle wuu cadaabi isagoo ciqaab adduun u soo dadajinaya, kuna badali qoom ka soo hadhay, waxna Alle kama dhimaan, Alle na isagaa awood leh.

Hadday dadku u gargaari waayaan Nabiga iyo diinta Alle, Ilaahay waa kuu u gargaaray markay gaaladii ka bixiyeen Maka oo uu godka galay isaga iyo saaxiibkiis Abuubakar kuna yidhi: ha walbahaarin Alle ayaa inala jiree, Ilaahayna xasil ku soo dajiyey kalimadii gaaladana hoos ka yeelay, kalimadii Alle ee xaqa ahna koryeelay, illeen Alle ayaa adkaada oo falsan, waana taas dhibaatada loo soo maray diinta islaamka, waxaa sugnaaday in markuu sayid Abuubakar ku yidhi Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): hadduu midkood dayo gondihiisa wuu ina arki lahaa, uu ku yidhi: maxaad u malayn labo Alle saddaxeeyo. Alle ayaana wax lagu tiirsada ah lana rumeeyo, diintiisana loo dagaallamo. **[At-Tawbah: 38-40].**

انفِرُوا۟ خِفَافًا وَثِقَالًا وَجَٰهِدُوا۟ بِأَمْوَٰلِكُمْ وَأَنفُسِكُمْ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ ۚ ذَٰلِكُمْ خَيْرٌ لَّكُمْ إِن كُنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿٤١﴾

41. Baxa idinkoo fudud iyo idinkoo culus kuna jahaada xoolihiinna iyo naftiinna jidka Alle, saasaana idiin khayr roon haddaad wax ogtihiin.

لَوْ كَانَ عَرَضًا قَرِيبًا وَسَفَرًا قَاصِدًا لَّٱتَّبَعُوكَ وَلَٰكِنۢ بَعُدَتْ عَلَيْهِمُ ٱلشُّقَّةُ ۚ وَسَيَحْلِفُونَ بِٱللَّهِ لَوِ ٱسْتَطَعْنَا لَخَرَجْنَا مَعَكُمْ يُهْلِكُونَ أَنفُسَهُمْ وَٱللَّهُ يَعْلَمُ إِنَّهُمْ لَكَٰذِبُونَ ﴿٤٢﴾

42. Hadduu jiro muuqaal adduunyo oo dhaw iyo socdaal gaaban way ku raaci lahaayeen waxaase ku fogaaday socdaalkii, waxayna ku dhaaran Alle: haddaannu kari waan idinla bixi lahayn, waxayna halaagi naftooda, Alle na waa og yahay inay been sheegi.

عَفَا ٱللَّهُ عَنكَ لِمَ أَذِنتَ لَهُمْ حَتَّىٰ يَتَبَيَّنَ لَكَ ٱلَّذِينَ صَدَقُوا۟ وَتَعْلَمَ ٱلْكَٰذِبِينَ ﴿٤٣﴾

43. Alle ha ku cafiyee maxaad u idantay intay kaaga caddaato kuwa runta sheegi ood ka ogaato beenaalayaasha.

لَا يَسْتَـْٔذِنُكَ ٱلَّذِينَ يُؤْمِنُونَ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْـَٔاخِرِ أَن يُجَـٰهِدُوا۟ بِأَمْوَٰلِهِمْ وَأَنفُسِهِمْ ۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌۢ بِٱلْمُتَّقِينَ ﴿٤٤﴾

44. Kaama idin waydiistaan kuwa rumeeyey Alle iyo maalinta dambe inay ku jahaadaan xoolahooda iyo naftooda, Alle na waa og yahay kuwa dhawrsada.

إِنَّمَا يَسْتَـْٔذِنُكَ ٱلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْـَٔاخِرِ وَٱرْتَابَتْ قُلُوبُهُمْ فَهُمْ فِى رَيْبِهِمْ يَتَرَدَّدُونَ ﴿٤٥﴾

45. Waxaase ku idin waydiin kuwaan rumaynin Alle iyo maalinta dambe, ayna shakiday quluubtoodu, waxayna ku noqnoqon (ku wareersan yihiin) shakigooda.

Duullimaadkii waynaa ee Tabuuk yuu Alle faray muslimiinta inay la baxaan Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) waxaana loo baxay xagga Shaam oo gaaladii Ruum, waxayna ahayd arrin adag oo lagu kala baxay, oo munaafiqiintii soocmeen, haddii qaniimo dhaw la heli ama socdaalku gaaban yahay way bixi lahaayeen, waxaase dheer jidka, waxayna ku dhaaran haddaan karro waan kula jiri lahayn, iyagoo been sheegi oo naftooda halaagi markuu Nabigu qaar ka mid ah u idmay inay hadhaan yuu Alle ku yidhi Nabiga: Alle ha ku saamaxo ee maxaad u fasaxday intay dadku dhab ugu kala caddaan, muslimiinta dhabta ahse ma idin warsadaan inay jahaadaan iyo in kale, waxaase idin warsada kuwaan Alle iyo aakhiro rumaynin oo shakiga la wareersan, aayaduhuna waxay caddeyn siday waajib u tahay inay u wada jiraan jahaadka una kala hadhin, si loo daafaco diinta islaamka iyo dhulka islaamka, muslimiintuna markay ka tageen jahaadkii xaqa ahaa nafna jecleysteen wakaas la qaybsaday oo la qabsaday dhulkoodii, wax sharaftoodii u soo celin oo aan jahaad dhab ah ahaynna ma jiro ee cid maqli ma jirtaa? **[At-Tawbah: 41-45].**

* وَلَوْ أَرَادُوا۟ ٱلْخُرُوجَ لَأَعَدُّوا۟ لَهُۥ عُدَّةً وَلَـٰكِن كَرِهَ ٱللَّهُ ٱنۢبِعَاثَهُمْ فَثَبَّطَهُمْ وَقِيلَ ٱقْعُدُوا۟ مَعَ ٱلْقَـٰعِدِينَ ﴿٤٦﴾

46. Hadday doonaan bixid waxay u darban lahaayeen qalab, wuxuuse nacay Alle bixiddooda, wuuna dib mariyey, waxaana lagu yidhi «gaaladii»: la fadhiista kuwa fadhiya.

لَوْ خَرَجُوا۟ فِيكُم مَّا زَادُوكُمْ إِلَّا خَبَالًا وَلَأَوْضَعُوا۟ خِلَـٰلَكُمْ يَبْغُونَكُمُ ٱلْفِتْنَةَ وَفِيكُمْ سَمَّـٰعُونَ لَهُمْ ۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌۢ بِٱلظَّـٰلِمِينَ ﴿٤٧﴾

47. Hadday baxaan dhexdiinna waxaan xumaan ahayn idiinma kordhiyaan, waxayna u dagdagi lahaayeen fasaadinta dhexdiinna iyagoo idinla dooni fidmo,

waxaana idin ku jira kuwo idiin dhagaysan, Alle na waa og yahay daalimiinta.

48. Waxay idinla dooneen fidno mar hore waxayna kuu gagadiyeen umuuraha intuu ka yimaado xaqu oo ka muuqdo amarka Alle (xaqa) iyagoo nici.

لَقَدِ ٱبْتَغَوُا۟ ٱلْفِتْنَةَ مِن قَبْلُ وَقَلَّبُوا۟ لَكَ ٱلْأُمُورَ حَتَّىٰ جَآءَ ٱلْحَقُّ وَظَهَرَ أَمْرُ ٱللَّهِ وَهُمْ كَٰرِهُونَ ﴿٤٨﴾

49. Waxaa ka mid ah kuwo dhihi i fasax hana i fidneyn waxayse ku dhaceen fidno, jahannamana way koobtay gaalada.

وَمِنْهُم مَّن يَقُولُ ٱئْذَن لِّى وَلَا تَفْتِنِّىٓ ۚ أَلَا فِى ٱلْفِتْنَةِ سَقَطُوا۟ ۗ وَإِنَّ جَهَنَّمَ لَمُحِيطَةٌۢ بِٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٤٩﴾

Munaafiqiinta iyo diin laawayashu waxba uma taraan muslimiinta, wayna u raacaan dagaalka wax faa'iido ahna kuma jirto, illeen hadday run sheegi way u darban lahaayeen jahaadkee, Alle ayaase nacay bixiddooda ee ha fadhiyeen sida kuwa fadhiya, hadday baxaan waxay ku abuuri war iyo xumaan muslimiinta dhexdeeda ah iyo fidno iyo balaayo ay la dooni muslimiinta, waxaana ku jira muslimiinta kuwo maqli warka munaafiqiinta, Alle se waa og yahay daalimiinta, horay bay u damceen fidno iyo qasba, uguna gadgadiyeen xaalka Nabiga iyo muslimiinta dhibkooda intuu ka muuqdo xaqu iyo amarka Alle iyagoo neceb, waxaase ka mida kuwo dhihi i fasax Nabiyow, hana igu fidneynin bixidda, waxayse ku dhaceen fidnadii iyo balaayadii, jahannamana waxay koobi gaalada. Halkaasna waxaa ka muuqda u darbashada jahaadka, ka digtoonida munaafiqiinta iyo war xumayaasha xumaanta la jecel muslimiinta, in Alle muujin xaqa oo koryeeli markay muslimiintu gartaan wanaagga kuna socdaan, waana inaan laga cudurdaar warsanin jahaadka ee waa in la muujiyaa niyad sami, khayr jacayl, daafaca islaamka iyo doonidda wanaagga iyo sharafta Alle agtiisa ah, isagood talasaarani adkaysi iyo shaqana badini. **[At-Tawbah: 46-49].**

50. Hadduu wanaag ku soo gaadho wuu walbahaarinayaa munaafiqiinta, hadday ku hesho dhibaatana waxay dhahayaan waan ka dadaalnay raaciddiisa, mar hore, wayna jeedsadaan iyagoo faraxsan.

إِن تُصِبْكَ حَسَنَةٌ تَسُؤْهُمْ ۖ وَإِن تُصِبْكَ مُصِيبَةٌ يَقُولُوا۟ قَدْ أَخَذْنَآ أَمْرَنَا مِن قَبْلُ وَيَتَوَلَّوا۟ وَّهُمْ فَرِحُونَ ﴿٥٠﴾

51. Waxaad dhahdaa naguma dhaco wax Alle noo qoray mooyee, isagaa gargaarhannaga ah ee Ilaahay uun ha tala saarteen mu'miniintu.

قُل لَّن يُصِيبَنَآ إِلَّا مَا كَتَبَ ٱللَّهُ لَنَا هُوَ مَوْلَىٰنَا ۚ وَعَلَى ٱللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ ٱلْمُؤْمِنُونَ ﴿٥١﴾

52. Waxaad dhahdaa ma waxaad nala sugaysaan waxaan labada wanaag midkood ahayn (guul ama shahaado) annaguna waxaan idin la sugaynaa inuu Alle idinku asiibo (ciqaabo) cadaab agtiisa ah ama gacmahannaga, ee suga annaguna waan idin la sugaynaaye.

قُلْ هَلْ تَرَبَّصُونَ بِنَآ إِلَّآ إِحْدَى ٱلْحُسْنَيَيْنِ ۖ وَنَحْنُ نَتَرَبَّصُ بِكُمْ أَن يُصِيبَكُمُ ٱللَّهُ بِعَذَابٍ مِّنْ عِندِهِۦٓ أَوْ بِأَيْدِينَا ۖ فَتَرَبَّصُوٓا۟ إِنَّا مَعَكُم مُّتَرَبِّصُونَ ﴿٥٢﴾

53. Waxaad dhahdaa bixiya wax ama ogolaansho ama qasab marnaba laydinkama aqbalee, illeen waxaad tihiin qoom faasiqiina.

قُلْ أَنفِقُوا۟ طَوْعًا أَوْ كَرْهًا لَّن يُتَقَبَّلَ مِنكُمْ ۖ إِنَّكُمْ كُنتُمْ قَوْمًا فَٰسِقِينَ ﴿٥٣﴾

54. Wax u diiday in la aqbalo bixintooda oon ka gaaloowgooda Alle iyo Rasuulkiisa ahayn ma jiro, mana yimaaddaan salaadda iyagoo wahsan mooyee, mana bixiyaan iyagoo neceb mooyee.

وَمَا مَنَعَهُمْ أَن تُقْبَلَ مِنْهُمْ نَفَقَٰتُهُمْ إِلَّآ أَنَّهُمْ كَفَرُوا۟ بِٱللَّهِ وَبِرَسُولِهِۦ وَلَا يَأْتُونَ ٱلصَّلَوٰةَ إِلَّا وَهُمْ كُسَالَىٰ وَلَا يُنفِقُونَ إِلَّا وَهُمْ كَٰرِهُونَ ﴿٥٤﴾

Munaafiqiinta waxaa ka mid ah kuwo Nabiga fasax waydiisan inay dagaalka ka hadhaan iyagoo sheegi inay fidmoobi hadday baxaan, waxayse dhab ugu dhaceen fidno, naarta jahannamana way koobi gaalo, hadday muslimiintu khayr helaanna way ka naxaan, hadday dhibaato ku timaadana waxay sheegaan inay dadaaleen waana farxaan, waxaan Alle qorinse muslimiinta kuma dhaco, isagaana gargaara ah muslimiintu ay talasaartaan, muslimiintuna waxay heli guul ama waxay ku dhiman shahaadannimo, gaalana ha sugto ciqaab Alle ama jab ku gaadha gacmaha muslimiinta, waxay bixiyaanna lagama aqbalo illeen waa faasiqiine, waxayna ka gaaloobeen Alle iyo Rasuulkiisa, salaaddana iyagoo wahsanayeey yimaaddaan, waxayna wax bixiyaan iyagoo neceb, illeen waa munaafiqiine. **[At-Tawbah: 50-54].**

55. Yeyna ku yaab galinnin xoolahoodu iyo caruurtoodu, wuxuu uun dooni Alle inuu ku ciqaabo nolosha adduun oy baxdo naftoodu iyagoo gaala ah.

فَلَا تُعۡجِبۡكَ أَمۡوَٰلُهُمۡ وَلَآ أَوۡلَٰدُهُمۡۚ إِنَّمَا يُرِيدُ ٱللَّهُ لِيُعَذِّبَهُم بِهَا فِي ٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَا وَتَزۡهَقَ أَنفُسُهُمۡ وَهُمۡ كَٰفِرُونَ ٥٥

56. Waxay ku dhaaran Alle inay idinla jiraan idinlamana jiraan, waase qoom cabsan.

وَيَحۡلِفُونَ بِٱللَّهِ إِنَّهُمۡ لَمِنكُمۡ وَمَا هُم مِّنكُمۡ وَلَٰكِنَّهُمۡ قَوۡمٞ يَفۡرَقُونَ ٥٦

57. Hadday helayaan meel ay magan galaan ama godad (buuro) ama meel ay galaan way u jeedsan lahaayeen iyagoo deg degi.

لَوۡ يَجِدُونَ مَلۡجَـَٔا أَوۡ مَغَٰرَٰتٍ أَوۡ مُدَّخَلٗا لَّوَلَّوۡاْ إِلَيۡهِ وَهُمۡ يَجۡمَحُونَ ٥٧

58. Waxaa ka mid ah kuwo kugu ceebin sadaqada (sakada) haddii la siiyana raalli noqon haddaan la siinninna cadhoon.

وَمِنۡهُم مَّن يَلۡمِزُكَ فِي ٱلصَّدَقَٰتِ فَإِنۡ أُعۡطُواْ مِنۡهَا رَضُواْ وَإِن لَّمۡ يُعۡطَوۡاْ مِنۡهَآ إِذَا هُمۡ يَسۡخَطُونَ ٥٨

59. Hadday ku raalli noqdaan waxay siin Alle iyo Rasuulkiisu, oy dhahaan waxaa nagu filan Alle, wuxuu naga siin Alle fadligiisa, Rasuulkiisuna wuu nasiin, anaguna Alle unbaan wax ka doonaynaa (saasaa u khayr roon).

وَلَوۡ أَنَّهُمۡ رَضُواْ مَآ ءَاتَىٰهُمُ ٱللَّهُ وَرَسُولُهُۥ وَقَالُواْ حَسۡبُنَا ٱللَّهُ سَيُؤۡتِينَا ٱللَّهُ مِن فَضۡلِهِۦ وَرَسُولُهُۥٓ إِنَّآ إِلَى ٱللَّهِ رَٰغِبُونَ ٥٩

Wax lala yaabana ma aha ama la wanaajisto xoolahooda iyo caruurtooda waxay un ku noqon khasaare aakharo iyo adduunbe, waxayna dhiman iyagoo gaalo ah, waxayna ku dhaaran inay la jiraan muslimiinta lamana jiraan ee way cabsan, hadday helaan meelay ku cararaanna way ku dag degi, qaarkoodna waxay ku ceebayn jireen Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) iyo muslimiinta waxay bixin, iyagoo haddii wax la siiyana raalli noqda hadday waayaanna cadhooda. Haddayse ku raalli noqdaan waxay Alle iyo Rasuulkiisu siiyaan oy ku kalsoonaadaan Alle iyo Rasuulkiisa saasaa u wanaag badnaan lahayd, tilmaantaasna waa tilmaanta munaafiqiinta, had iyo jeerna waxay ceebeeyaan oo xumaan iyo shar la doonaan muslimiinta sidii kii ku yidhi Nabiga: caddaalad maadan falin, ee uu ku yidhi: yaa caddaalad fali haddaanan caddaalad falin. Xumaan badanaa kuwaasu. **[At-Tawbah: 55-59].**

60. Sadaqada (zakada) waxaa uun muta fuqarada, masaakiinta, kuwa ka shaqeeya, kuwa la soo dhawayn quluubtooda, kuwa la xorayn, kuwa (xaqa) ku daynoobay, jidka Alle iyo socdaalka, waana wax Alle faral yeelay, Ilaahayna waa oge falsan.

* إِنَّمَا ٱلصَّدَقَٰتُ لِلْفُقَرَآءِ وَٱلْمَسَٰكِينِ وَٱلْعَٰمِلِينَ عَلَيْهَا وَٱلْمُؤَلَّفَةِ قُلُوبُهُمْ وَفِى ٱلرِّقَابِ وَٱلْغَٰرِمِينَ وَفِى سَبِيلِ ٱللَّهِ وَٱبْنِ ٱلسَّبِيلِ ۖ فَرِيضَةً مِّنَ ٱللَّهِ ۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿٦٠﴾

61. Waxaa ka mid ah (munaafiqiinta) kuwa dhiba Nabiga oo dhaha waa wax walba maqle, waxaad dhahdaa waa khayr maqlihiinna wuxuuna rumayn Alle, wuxuuna u rumayn mu'miniinta, waana u naxariistaa kuwa rumeeyey oo idinka mid ah, kuwa dhiba Rasuulka Alle waxay mudan cadaab daran.

وَمِنْهُمُ ٱلَّذِينَ يُؤْذُونَ ٱلنَّبِىَّ وَيَقُولُونَ هُوَ أُذُنٌ ۚ قُلْ أُذُنُ خَيْرٍ لَّكُمْ يُؤْمِنُ بِٱللَّهِ وَيُؤْمِنُ لِلْمُؤْمِنِينَ وَرَحْمَةٌ لِّلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ مِنكُمْ ۚ وَٱلَّذِينَ يُؤْذُونَ رَسُولَ ٱللَّهِ لَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٦١﴾

62. Waxay idiinku dhaaran Alle inay idin raalli galinayaan, Alle iyo Rasuulkiisa yaa mudnaan badan inay raalli galiyaan hadday mu'miniin yihiin.

يَحْلِفُونَ بِٱللَّهِ لَكُمْ لِيُرْضُوكُمْ وَٱللَّهُ وَرَسُولُهُۥٓ أَحَقُّ أَن يُرْضُوهُ إِن كَانُوا۟ مُؤْمِنِينَ ﴿٦٢﴾

63. Miyeyna ogayn ciddii la dagaallanta (oo khilaafta) Alle iyo Rasuulkiisa inuu mudan naarta jahannama, kuna waari dhexdeeda, arrintaasuna waa dulli wayn.

أَلَمْ يَعْلَمُوٓا۟ أَنَّهُۥ مَن يُحَادِدِ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ فَأَنَّ لَهُۥ نَارَ جَهَنَّمَ خَٰلِدًا فِيهَا ۚ ذَٰلِكَ ٱلْخِزْىُ ٱلْعَظِيمُ ﴿٦٣﴾

Zakada waxaa mudan siddeeddaas nooc ee Alle sheegay isagoon cidna u dayn, taasna waxay ku tusin inay bixinta zakadu waajib tahay, in siddeeddaas kooxood mudan yihiin, wanaagga iyo naxariisashada diinta islaamku ma aha hadal iyo war la sheeg sheego, saas darteed waa in la bixiyo zakada lana siiyo dadkaas iyo meelahaas mudan.

Tan kale munaafiqiintu waa cudur ku dhex jira muslimiinta wax kastana wax ka sheegi, waxaana ka mid ah inay Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ku dhahayeen waa wax walba maqle, khayrka iyo wanaagga yuuna maqlayey, ciddiise dhibta waxay mudan cadaab daran, dhaar beena yeyna maraan si ay u raalli galiyaan muslimiinta, Alle ayaase mudan in la raalli galiyo, ciddii la colloowda Alle iyo Rasuulkana wuxuu mudan cadaab daran. **[At-Tawbah: 60-63].**

يَحۡذَرُ ٱلۡمُنَٰفِقُونَ أَن تُنَزَّلَ عَلَيۡهِمۡ سُورَةٞ تُنَبِّئُهُم بِمَا فِي قُلُوبِهِمۡۚ قُلِ ٱسۡتَهۡزِءُوٓاْ إِنَّ ٱللَّهَ مُخۡرِجٞ مَّا تَحۡذَرُونَ ٦٤

64. Waxay ka digtoon yihiin munaafiqiintu in lagu soo dajiyo suurad ka warrami waxa quluubtooda ku sugan, waxaad dhahdaa jeesjeesa, Alle wuxuu soo bixin waxaad ka digtoon tihiin (cabsanaysaan).

وَلَئِن سَأَلۡتَهُمۡ لَيَقُولُنَّ إِنَّمَا كُنَّا نَخُوضُ وَنَلۡعَبُۚ قُلۡ أَبِٱللَّهِ وَءَايَٰتِهِۦ وَرَسُولِهِۦ كُنتُمۡ تَسۡتَهۡزِءُونَ ٦٥

65. Haddaad warsato waxay dhihi waan un yar tiimbanaynay oon ciyaaraynay, waxaad dhahdaa ma Alle iyo aayaadkiisa iyo rasuulkiisa yaad ku jees jeesayseen.

لَا تَعۡتَذِرُواْ قَدۡ كَفَرۡتُم بَعۡدَ إِيمَٰنِكُمۡۚ إِن نَّعۡفُ عَن طَآئِفَةٖ مِّنكُمۡ نُعَذِّبۡ طَآئِفَةَۢ بِأَنَّهُمۡ كَانُواْ مُجۡرِمِينَ ٦٦

66. Ha cudur daarannina waad gaalowdeen rumayn ka dib, haddaan cafinno koox idinka mid ah waxaan cadaabaynaa koox, illeen iyagu waa dambiilayaale.

ٱلۡمُنَٰفِقُونَ وَٱلۡمُنَٰفِقَٰتُ بَعۡضُهُم مِّنۢ بَعۡضٖۚ يَأۡمُرُونَ بِٱلۡمُنكَرِ وَيَنۡهَوۡنَ عَنِ ٱلۡمَعۡرُوفِ وَيَقۡبِضُونَ أَيۡدِيَهُمۡۚ نَسُواْ ٱللَّهَ فَنَسِيَهُمۡۚ إِنَّ ٱلۡمُنَٰفِقِينَ هُمُ ٱلۡفَٰسِقُونَ ٦٧

67. Munaafiqiintu rag iyo haweenba qaarkood qaarka kale yuu ka ahaaday, waxayna faraan xumaanta, waxayna ka reebaan wanaagga, waxayna laabaan gacmahooda (wax ma bixiyaan), Alle ayayna halmaameen isna aabayeeldarro yuu kula dhaqmay, munaafiqiin iyaga umbaa faasiqiin ah.

68. Wuxuuna Alle u yaboohay munaafiqiintaa rag iyo haweenba iyo gaalada naarta jahannamo, wayna ku dhex waari, iyadaana ku filan, waxaana lacnaday Alle, waxayna mudan cadaab joogta ah.

وَعَدَ ٱللَّهُ ٱلْمُنَٰفِقِينَ وَٱلْمُنَٰفِقَٰتِ وَٱلْكُفَّارَ نَارَ جَهَنَّمَ خَٰلِدِينَ فِيهَا ۚ هِىَ حَسْبُهُمْ ۚ وَلَعَنَهُمُ ٱللَّهُ ۖ وَلَهُمْ عَذَابٌ مُّقِيمٌ ﴿٦٨﴾

Munaafiqiinta rag iyo haweenba waa colka diinta islaamka iyo muslimiinta waxayna ku jees jeesi kuna ciyaareen Alle iyo Rasuulka iyo xaqa, waxayna is faraan xumaanta, wanaaggana way iska reebaan, Alle iyo xaqana way halmaamaan waxayse mudan cadaab daran oy ku waari kuna dulloobi, illeen waa dambiilayaale.

Aayaduhuna waxay ku soo dageen mar ay ku sheekeysanayeen dhibka iyo xumaanta muslimiinta lahaayeenna ma kuwanaa iska celin reer Ruum, barri baan arkaynaa iyagoo xidh xidhan. Munaafiqna wax uma taro muslime wuu uun dhibaa. **[At-Tawbah: 64-68].**

69. Waxaad la mid tihiin kuwii idinka horreeyey, waxayna ahaayeen kuwo idinka badan xoog iyo xoolo iyo carruur waxayna ku raaxaysteen nasiibkoodii idinkuna waxaad ku raaxaysateen nasiibkiin siday ugu raaxaysteen kuwii idinka horreeyey nasiibkoodii, waadna dhumbateen xumaanta siday u dhumbadeen, kuwaas waxaa buray camalkoodii adduun iyo aakhiraba, kuwaasuna iyaga umbaa khasaaray.

كَٱلَّذِينَ مِن قَبْلِكُمْ كَانُوٓا۟ أَشَدَّ مِنكُمْ قُوَّةً وَأَكْثَرَ أَمْوَٰلًا وَأَوْلَٰدًا فَٱسْتَمْتَعُوا۟ بِخَلَٰقِهِمْ فَٱسْتَمْتَعْتُم بِخَلَٰقِكُمْ كَمَا ٱسْتَمْتَعَ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِكُم بِخَلَٰقِهِمْ وَخُضْتُمْ كَٱلَّذِى خَاضُوٓا۟ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ حَبِطَتْ أَعْمَٰلُهُمْ فِى ٱلدُّنْيَا وَٱلْءَاخِرَةِ ۖ وَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْخَٰسِرُونَ ﴿٦٩﴾

70. Miyeyna soo gaadhin warkii kuwii ka horreeyey oo ah qoomkii Nabi Nuux, caad, thamuud, qoomkii Nabi Ibraahiim, madyan dadkeedi iyo qoomkii Nabi Luud, ee la

أَلَمْ يَأْتِهِمْ نَبَؤُا۟ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ قَوْمِ نُوحٍ وَعَادٍ وَثَمُودَ وَقَوْمِ إِبْرَٰهِيمَ وَأَصْحَٰبِ مَدْيَنَ وَٱلْمُؤْتَفِكَٰتِ ۚ أَتَتْهُمْ رُسُلُهُم بِٱلْبَيِّنَٰتِ ۖ فَمَا كَانَ ٱللَّهُ

dabageddiyay waxay ula timid rasuulladoodii xujooyin, Alle na ma aha mid dulmiya iyagaase naftooda dulmiya.

لِيَظْلِمَهُمْ وَلَٰكِن كَانُوٓاْ أَنفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ ﴿٧٠﴾

Aayadahan wuxuu Alle ku sheegi inay ku daydeen kuwa xaqa diidi gaaladii hore kana xoolo, xoog iyo carruur badnaa, waxayna ku raaxaysteen adduunka sidii kuwaas hore, waxayna xumaanta u dhumbadeen siday kuwaas u dhumbadeen, waana buray camalkoodu adduun iyo aakhiro, waana kuwo khasaaray. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: waxaa maraysaan waddadii gaaladii taako taako iyo dhudhun dhudhun xataa hadday galaan god kharaaba waad ka daba galaysaan, sidii qoomamkii ka horreeyey ee Nabiyada beeniyey markay rasuulladii ula yimaadeen xujooyin iyo xaq, wayse dulmiyeen naftooda, illeen Alle wax ma dulmiyee, waxaase habboon rumayn iyo wanaag. **[At-Tawbah: 69-70].**

71. Mu'miniinta rag iyo haweenba qaarkood qaarka (kale) waa u sokeeye waxayna faraan wanaagga kana reebaan xumaanta, waxayna oogaan salaadda, waxayna bixiyaan zakada, waxayna addeecaan Alle iyo Rasuulkiisa, kuwaas waxaa u naxariisan Alle, illeen Alle waa adkaade fal sane.

وَٱلْمُؤْمِنُونَ وَٱلْمُؤْمِنَٰتُ بَعْضُهُمْ أَوْلِيَآءُ بَعْضٍ ۚ يَأْمُرُونَ بِٱلْمَعْرُوفِ وَيَنْهَوْنَ عَنِ ٱلْمُنكَرِ وَيُقِيمُونَ ٱلصَّلَوٰةَ وَيُؤْتُونَ ٱلزَّكَوٰةَ وَيُطِيعُونَ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥٓ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ سَيَرْحَمُهُمُ ٱللَّهُ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٧١﴾

72. Wuxuu u yaboohay Alle mu'miniinta rag iyo haweenba jannnooyin ay socoto dhexdeeda wabiyaalkii iyagoo ku waari dhexdeeda, iyo guryo wanaagsan oo jannada cadnin (nagaadiga), raalli ahaanshaha Alle ayaana ka wayn, arrintaasuna waa uun liibaanta wayn.

وَعَدَ ٱللَّهُ ٱلْمُؤْمِنِينَ وَٱلْمُؤْمِنَٰتِ جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَا وَمَسَٰكِنَ طَيِّبَةً فِى جَنَّٰتِ عَدْنٍ ۚ وَرِضْوَٰنٌ مِّنَ ٱللَّهِ أَكْبَرُ ۚ ذَٰلِكَ هُوَ ٱلْفَوْزُ ٱلْعَظِيمُ ﴿٧٢﴾

Aayadahani waxay caddeyn in mu'miniintu rag iyo haweenba sokeeye iyo qaraabo isu gargaara yihiin, wanaaggana is faraan, xumaantana iska reebaan, salaaddana si wanaaga u oogaan, zakadana bixiyaan, Alle iyo Rasuulkiisana adeecaan, waana kuwa naxariista Alle awoodda lehe falka san muta. Wuxuuna

Alle u yaboohay jannooyin aan laga guuraynin oo wabiyaal dhex socdaan, isagoo raalli ahaanshaha Ilaahay ka wayn yahay, waana liibaanta ugu wayn arrintaasi, waxaana halkaas ka muuqda siday u kala duwan yihiin tilmaanta munaafiqiinta iyo tan mu'miniinta, waxaana ka mid ah tilmaanta mu'miniinta inay isku tiirsanaadaan, isuna naxariistaan, siduu Rasuulku yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): mu'minku mu'minka wuxuu u yahay sida dhista qaarkeed qaarka kale u xoojiyo iyo xadiithka kale ee caddayn inay jidh kaliya yihiin isuna xanuunsan, sidaas darteed khilaaf badane, xumaan fale, naxariis yare, ma gargaare, mu'min toosan ma yahay? **[At-Tawbah: 71-72].**

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِيُّ جَٰهِدِ ٱلْكُفَّارَ وَٱلْمُنَٰفِقِينَ وَٱغْلُظْ عَلَيْهِمْ ۚ وَمَأْوَىٰهُمْ جَهَنَّمُ ۖ وَبِئْسَ ٱلْمَصِيرُ ﴿٧٣﴾

73. Nabiyow la jahaad gaalada iyo munaafiqiinta, kuna darrow, hoygooduna waa naarta jahannamo iyadaana u xun meel loo ahaan.

يَحْلِفُونَ بِٱللَّهِ مَا قَالُوا۟ وَلَقَدْ قَالُوا۟ كَلِمَةَ ٱلْكُفْرِ وَكَفَرُوا۟ بَعْدَ إِسْلَٰمِهِمْ وَهَمُّوا۟ بِمَا لَمْ يَنَالُوا۟ ۚ وَمَا نَقَمُوٓا۟ إِلَّآ أَنْ أَغْنَىٰهُمُ ٱللَّهُ وَرَسُولُهُۥ مِن فَضْلِهِۦ ۚ فَإِن يَتُوبُوا۟ يَكُ خَيْرًا لَّهُمْ ۖ وَإِن يَتَوَلَّوْا۟ يُعَذِّبْهُمُ ٱللَّهُ عَذَابًا أَلِيمًا فِى ٱلدُّنْيَا وَٱلْءَاخِرَةِ ۚ وَمَا لَهُمْ فِى ٱلْأَرْضِ مِن وَلِىٍّ وَلَا نَصِيرٍ ﴿٧٤﴾

74. Waxay ku dhaaran inayna dhihin (hadal xun) iyagoo yidhi hadal gaalnimo ayna gaaloobeen islaannimo (muuqa) kadib, ayna dooneen waxayna gaadhin, waxayna ku naceen ku hodnaynta Alle iyo Rasuulkiisa fadligiisa, hadday toobadkeenaan khayr bay u tahay, hadday jeedsadaanna wuxuu Alle cadaabi cadaab daran adduun iyo aakhiraba, gargaarana kuma leh dhulka dhexdiisa iyo sokeeye midna.

Alle wuxuu faray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu la jahaado gaalada iyo munaafiqiinta kuna darraado ayna helin jileec illeen hoygoodu waa naartii jahannamee, waxayna ku dhaartaan been iyo gaalnimo intay islaannimo muuqa muujiyeen ka dib, way dooneen, waxayna la cadhoodeen u nicmeynta Alle iyo Rasuulkiisa, hadday toobad keenaanna way u fiican tahay, hadday jeedsadaanna Alle wuxuu u cadaabi si daran adduun iyo aakhiraba, mana helayaan gargaare, taasina waxay ku tusin xumaanta gaalada, munaafiqiinta, diin laawayaasha iyo xaq diidayaasha, ayna habboon tahay in laga foojignaado. **[At-Tawbah: 73-74].**

75. Waxaa ka mid ah kuwo la ballamay Alle hadduu wax ka siiyo fadligiisa inuu sadaqaysto noqdana kuwa suuban.

76. Markuu wax ka siiyey fadligiisa ay ku bakhayleen jeedsadeenna iyagoo diidi.

77. Wuxuu ku reebay quluubtooda munaafiqnimo tan iyo maalintay la kulmi ku baajintooda Alle waxay kula ballantameen iyo beenintoodii darteed.

78. Miyeyna ogayn in Alle og yahay qarsoodigooda iyo muuqooda iyo in Alle og yahay waxa maqan.

79. Waa kuwa ku ceebayn kuwa sadaqaysan oo mu'miniinta ah sadaqadooda iyo kuwaan helaynin tabartooda mooyee, way ku jees jeesi, Allana wuu ku jees jeesaa iyaga waxayna mudan cadaab daran.

* وَمِنْهُم مَّنْ عَٰهَدَ ٱللَّهَ لَئِنْ ءَاتَىٰنَا
مِن فَضْلِهِۦ لَنَصَّدَّقَنَّ وَلَنَكُونَنَّ مِنَ
ٱلصَّٰلِحِينَ ﴿٧٥﴾

فَلَمَّآ ءَاتَىٰهُم مِّن فَضْلِهِۦ بَخِلُوا۟ بِهِۦ
وَتَوَلَّوا۟ وَّهُم مُّعْرِضُونَ ﴿٧٦﴾

فَأَعْقَبَهُمْ نِفَاقًا فِى قُلُوبِهِمْ إِلَىٰ يَوْمِ
يَلْقَوْنَهُۥ بِمَآ أَخْلَفُوا۟ ٱللَّهَ مَا وَعَدُوهُ
وَبِمَا كَانُوا۟ يَكْذِبُونَ ﴿٧٧﴾

أَلَمْ يَعْلَمُوٓا۟ أَنَّ ٱللَّهَ يَعْلَمُ سِرَّهُمْ
وَنَجْوَىٰهُمْ وَأَنَّ ٱللَّهَ عَلَّٰمُ ٱلْغُيُوبِ ﴿٧٨﴾

ٱلَّذِينَ يَلْمِزُونَ ٱلْمُطَّوِّعِينَ مِنَ
ٱلْمُؤْمِنِينَ فِى ٱلصَّدَقَٰتِ وَٱلَّذِينَ لَا
يَجِدُونَ إِلَّا جُهْدَهُمْ فَيَسْخَرُونَ مِنْهُمْ
سَخِرَ ٱللَّهُ مِنْهُمْ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٧٩﴾

Waxaa ka mid ah dabeecadda munaafiqiinta inay ceebeeyaan muslimiinta waxna ka sheegaan, iyo inay buriyaan ballanka, markuu Alle wax siiyana ay ka gaaloobaan nicmada, kuna bakhaylaan si qalbigoodu ugu waarto munaafiqnimo iyo kufri caloolo, illeen waxay baajiyeen ballankii Alle waxayna beeniyeen xaqii, sidii iyadoo uusan ogayn Alle qarsoodigooda iyo muuqooda iyo waxa maqan, waxayna sheegaan fasirayaashu inay aayaduhu ku soo degeen nin la dhihi jiray Thaclaba oo xoola batay markaas ka tagay cibadaadii Alle, zakadiina diiday, qisaduse ma sugna, cid kastase way u taallaa hadday xaqa ka leexato, mana haboona in mu'miniinta lagu ceebeeyo waxa yar ee ay awoodaan hadday sadaqaystaan, ciddii ceebeysana Alle ayaa ka abaal marin oo u ciqaabi si daran, waxaana la sheegay in Cabdiraxmaan binu Coof sadaqaystay wax badan, asaxaabi kalana ku deeqay wax yar markaasay munaafiqiintii dureen labadiiba. Diinta islaamkuna ma rabto ceebeynta, xumaan sheegga iyo xaqiraadda muslimiinta. **[At-Tawbah: 75-79].**

80. Ama u dambidhaaf warso ama ha u dambidhaaf warsannin, haddaad u dambi dhaaf warsato toddobaatan jeer uma dambidhaafo Alle, illeen iyagu waxay ka gaaloobeen Alle iyo Rasuulkiisa, Alle na ma hanuuniyo qoomka faasiqiinta ah.

81. Waxay ku farxeen kuwii ka dib dhacay fadhigoodii Rasuulka gadaashiisa, waxayn naceen inay ku jahaadaan xoolahooda iyo naftooda jidka Alle, waxayna dhaheen ha ku bixina kulaylka, waxaad dhahdaa naarta jahannamo yaa ka kulayl daran hadday wax kasi.

82. Ee ha qosleen wax yar (adduunka), hana ooyeen wax badan (aakhiro), iyadoo laga abaal marin waxay kasbadeen.

83. Hadduu kuu soo celiyo Alle koox ka mid ah oy kaa idin waydiistaan bixid waxaad dhahdaa bixi maysaan la jirkayga waligiin, lana dagaallami maysaan col la jirkayga illeen waxaad jeclaateen fadhi markii horaba ee la fadhiya kuwa dib maray.

ٱسْتَغْفِرْ لَهُمْ أَوْ لَا تَسْتَغْفِرْ لَهُمْ إِن
تَسْتَغْفِرْ لَهُمْ سَبْعِينَ مَرَّةً فَلَن يَغْفِرَ
ٱللَّهُ لَهُمْ ۚ ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ كَفَرُوا۟ بِٱللَّهِ
وَرَسُولِهِۦ ۗ وَٱللَّهُ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ
ٱلْفَٰسِقِينَ ﴿٨٠﴾

فَرِحَ ٱلْمُخَلَّفُونَ بِمَقْعَدِهِمْ خِلَٰفَ
رَسُولِ ٱللَّهِ وَكَرِهُوٓا۟ أَن يُجَٰهِدُوا۟
بِأَمْوَٰلِهِمْ وَأَنفُسِهِمْ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ
وَقَالُوا۟ لَا تَنفِرُوا۟ فِى ٱلْحَرِّ ۗ قُلْ نَارُ
جَهَنَّمَ أَشَدُّ حَرًّا ۚ لَّوْ كَانُوا۟ يَفْقَهُونَ ﴿٨١﴾

فَلْيَضْحَكُوا۟ قَلِيلًا وَلْيَبْكُوا۟ كَثِيرًا
جَزَآءًۢ بِمَا كَانُوا۟ يَكْسِبُونَ ﴿٨٢﴾

فَإِن رَّجَعَكَ ٱللَّهُ إِلَىٰ طَآئِفَةٍ مِّنْهُمْ
فَٱسْتَـْٔذَنُوكَ لِلْخُرُوجِ فَقُل لَّن تَخْرُجُوا۟
مَعِىَ أَبَدًا وَلَن تُقَٰتِلُوا۟ مَعِىَ عَدُوًّا ۖ
إِنَّكُمْ رَضِيتُم بِٱلْقُعُودِ أَوَّلَ مَرَّةٍ
فَٱقْعُدُوا۟ مَعَ ٱلْخَٰلِفِينَ ﴿٨٣﴾

Munaafiqiintu ma mutaan in loo dambi dhaaf warsado, wuxuuna Alle Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ka reebay inuu u dambidhaaf warsado, illeen waxay ka gaaloobeen Alle iyo Rasuulkiisa, waxayna noqdeen faasiqiin aan hanuunayn, kuna farxay inay ka hadheen jahaadka Nabigu u baxay, reebatayna xoolahoodii iyo naftoodii, isuna dardaarmay inayna kulaylka ku bixin, waxaase ka dambaysa naartii jahannamo hadday wax kasi,

ee adduunka wax yar ha qosleen, aakhiray waxbadan ooyiye, waxaana laga abaal marin waxay kasbanayeen, hadday koox ka mida doonaan inay idinla baxaan diida inay idinla baxaan ama dagaal idinla galaan, illeen waa kuwii markii horaba iska fadhiistaye oo nacay jahaadkee, munaafiqiinna waa colka muslimiinta. **[At-Tawbah: 80-83].**

وَلَا تُصَلِّ عَلَىٰٓ أَحَدٍ مِّنْهُم مَّاتَ أَبَدًا وَلَا تَقُمْ عَلَىٰ قَبْرِهِۦٓ ۖ إِنَّهُمْ كَفَرُوا۟ بِٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ وَمَاتُوا۟ وَهُمْ فَٰسِقُونَ ﴿٨٤﴾

84. Ha ku tukannin mid ka mid ah oo dhinta waligeed, hana kor istaagin qabrigiisa, illeen waxay ka gaaloobeen Alle iyo Rasuulkiisa waxayna dhinteen iyagoo faasiqiin ah.

وَلَا تُعْجِبْكَ أَمْوَٰلُهُمْ وَأَوْلَٰدُهُمْ ۚ إِنَّمَا يُرِيدُ ٱللَّهُ أَن يُعَذِّبَهُم بِهَا فِى ٱلدُّنْيَا وَتَزْهَقَ أَنفُسُهُمْ وَهُمْ كَٰفِرُونَ ﴿٨٥﴾

85. Ee yeyna ku yaab galinnin xoolahoodu iyo caruurtoodu, wuxuu uun Alle dooni inuu ku cadaabo adduunka ay baxdana naftoodu iyagoo gaalo ah.

وَإِذَآ أُنزِلَتْ سُورَةٌ أَنْ ءَامِنُوا۟ بِٱللَّهِ وَجَٰهِدُوا۟ مَعَ رَسُولِهِ ٱسْتَـْٔذَنَكَ أُو۟لُوا۟ ٱلطَّوْلِ مِنْهُمْ وَقَالُوا۟ ذَرْنَا نَكُن مَّعَ ٱلْقَٰعِدِينَ ﴿٨٦﴾

86. Marka la soo dejiyo suurad (dhihi) rumeeya Alle, jahaadana la jirka Rasuulkiisa waxaa idan ku warsada kuwa awoodda leh oo ka mid ah waxayna dhahaan na daa aan noqonno kuwa fadhiyee.

رَضُوا۟ بِأَن يَكُونُوا۟ مَعَ ٱلْخَوَالِفِ وَطُبِعَ عَلَىٰ قُلُوبِهِمْ فَهُمْ لَا يَفْقَهُونَ ﴿٨٧﴾

87. Waxay ka raalli noqdeen inay noqdaan kuwa dib maray, waxaana la daboolay quluubtooda waxna ma kasayaan.

Alle wuxuu ka reebay Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu ku tukado una duceeyo ciddii munaafiqiinta ka mida oo dhimata iyo inuu qabrigeeda kor istaago, illeen waxay ka gaaloobeen Alle iyo rasuulkiisa, waxayna ku dhinteen iyagoo faasiqiine, waxaana la sheegay inay ku soo dagtay aayaddu xaalkii munaafiqiinta, sida Cabdullahi binu Ubayi. Waana inaadan la yaabin ama waynaysannin xoolaha iyo caruurta munaafiqiinta, aduunkana waa lagu cadaabi waxayna dhiman iyagoo gaalo ah, marka jahaadka la farana waxaa inay iska hadhaan warsada kuwa awoodda leh oo ka mid ah, iyagoo jecel inay xaaska iyo dadka tabarta yar la hadhaan. Waxaana la daboolay qalbigooda waxna ma kasayaan. Suuradduna wax badan yey ka warrami xaalka munaafiqiinta, waxaase habboon in laga digtoonaado camalkooda iyo habkooda oo kale. **[At-Tawbah: 84-87].**

لَٰكِنِ ٱلرَّسُولُ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟
مَعَهُۥ جَٰهَدُوا۟ بِأَمْوَٰلِهِمْ وَأَنفُسِهِمْ ۚ
وَأُو۟لَٰٓئِكَ لَهُمُ ٱلْخَيْرَٰتُ ۖ وَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ
ٱلْمُفْلِحُونَ ﴿٨٨﴾

88. Rasuulkase iyo kuwa rumeeyey ee la jira way ku jahaadaan xoolahooda iyo naftooda waxaana kuwaas u sugnaaday khayraad, kuwaaasuna waa uun kuwa liibaanay.

أَعَدَّ ٱللَّهُ لَهُمْ جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا
ٱلْأَنْهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَا ۚ ذَٰلِكَ ٱلْفَوْزُ
ٱلْعَظِيمُ ﴿٨٩﴾

89. Wuxuuna u darbay Alle jannooyin oy socoto dhexdeeda wabiyadii iyagoo ku waari dhexdeeda, taasina waa liibaan wayn.

وَجَآءَ ٱلْمُعَذِّرُونَ مِنَ ٱلْأَعْرَابِ لِيُؤْذَنَ
لَهُمْ وَقَعَدَ ٱلَّذِينَ كَذَبُوا۟ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ ۚ
سَيُصِيبُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مِنْهُمْ عَذَابٌ
أَلِيمٌ ﴿٩٠﴾

90. Waxaa yimid kuwii cudurdaaranayey oo reer baadiyaha ahaa in loo idmo (dib mar) waxaana iska fadhiistay (iyagoon cudurdaaran) kuwii u beensheegay Alle iyo Rasuulkiisa (ee iimaan sheegtay ama gargaarid), waxaana ku dhici kuwii gaaloobay oo ka mida cadaab daran.

Rasuulkase iyo mu'miniinta la jira ee xaqa rumeeyey waxay ku jahaadaan xoolahooda iyo naftooda, waxayna mudan wanaag waana kuwa liibaanay, waxayan gali jannooyin ay ku waari, waana liibaanta wayn. Had iyo jeerna way cudur-daaran jireen reer baadiyaha kuwa ka mida, wayna iska fadhiisteen kuwii beeniyey Alle iyo Rasuulkiisa, waxaase haleeli cadaab daran. Taasina waxay muujin xumaanta nolosha munaafiqiinta iyo siday qas iyo lab iyo wareerin ugula dhex noolaayeen muslimiinta, munaafiqiinna wanaag iyo sharaf waa ka fog yihiin. **[At-Tawbah: 88-90].**

لَّيْسَ عَلَى ٱلضُّعَفَآءِ وَلَا عَلَى ٱلْمَرْضَىٰ
وَلَا عَلَى ٱلَّذِينَ لَا يَجِدُونَ مَا يُنفِقُونَ
حَرَجٌ إِذَا نَصَحُوا۟ لِلَّهِ وَرَسُولِهِۦ ۚ مَا عَلَى
ٱلْمُحْسِنِينَ مِن سَبِيلٍ ۚ وَٱللَّهُ غَفُورٌ
رَّحِيمٌ ﴿٩١﴾

91. Dhib ma saarra kuwa tabarta yar, kuwa buka iyo kuwaan helayn waxay bixiyaan, hadday u naseexeeyaan (diinta) Alle iyo Rasuulkiisa, kuwa sama falana jid laguma leh Alle na waa dambi dhaafe naxariista.

92. Kuwiina dhib masaarra kuu yimid inaad xambaarto (gaadiid siisid) markaas aad ku tidhi ma helayo waxaan idinku xambaaro, markaas jeedsaday iyagoo indhahoodu la daadan illin walbahaar inayna helin waxay bixiyaan.

وَلَا عَلَى ٱلَّذِينَ إِذَا مَآ أَتَوْكَ لِتَحْمِلَهُمْ قُلْتَ لَآ أَجِدُ مَآ أَحْمِلُكُمْ عَلَيْهِ تَوَلَّوا۟ وَّأَعْيُنُهُمْ تَفِيضُ مِنَ ٱلدَّمْعِ حَزَنًا أَلَّا يَجِدُوا۟ مَا يُنفِقُونَ ﴿٩٢﴾

93. Waxaa uun jid lagu leeyahay kuwa ku idan warsada iyagoo hodana oo ka raalli noqday inay ka midnoqdaan kuwa hadhay (xaaska) wuxuuna Alle daboolay quluubtooda waxna ma oga.

* إِنَّمَا ٱلسَّبِيلُ عَلَى ٱلَّذِينَ يَسْتَـْٔذِنُونَكَ وَهُمْ أَغْنِيَآءُ رَضُوا۟ بِأَن يَكُونُوا۟ مَعَ ٱلْخَوَالِفِ وَطَبَعَ ٱللَّهُ عَلَىٰ قُلُوبِهِمْ فَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٩٣﴾

Jahaadkuna ma aha in cid walba lagu dhibi ee waxaa uun laga rabaa ciddii awoodda, saas darteed dambi ma saarra kuwa tabarta yar, kuwa buka, kuwaan helayn waxay ku bixiyaan jahaadka, hadday niyadsamaadaan, sidoo kale dambi ma saarra kuwii Nabiga u yimid iyagoo warsan inuu siiyo gaadiid ay ku jahaadaan, markaas noqday iyagoo ooyi oo walbahaarsan inayna helin waxay bixiyaan, waxaase jid lagu leeyahay kuwa xoolaha leh oo jeclaaday inay ka mid noqdaan kuwa iska fadhiistay, waana kuwo la daabacay qalbigooda oon wax ogayn, taasina waxay muujin waajibnimada jahaadka, difaaca xaqa iyo diinta islaamka, iyo inaan waxba laga hagranin u shaqaynta diinta iyo xaqa. **[At-Tawbah: 91-93].**

94. Way idiin cudurdaaran markaad u noqotaan xaggooda, waxaad dhahdaan ha cudurdaarannina idiin rumeyn meynee, wuu nooga warramay Alle xaalkiinnee, Alle na wuu arkaa camalkiinnee iyo Rasuulkiisu, markaasna waxaa laydiin celin Allaha og waxa maqan iyo waxaa muuqdaba oo idiinka warrami waxaad camal falayseen.

يَعْتَذِرُونَ إِلَيْكُمْ إِذَا رَجَعْتُمْ إِلَيْهِمْ ۚ قُل لَّا تَعْتَذِرُوا۟ لَن نُّؤْمِنَ لَكُمْ قَدْ نَبَّأَنَا ٱللَّهُ مِنْ أَخْبَارِكُمْ ۚ وَسَيَرَى ٱللَّهُ عَمَلَكُمْ وَرَسُولُهُۥ ثُمَّ تُرَدُّونَ إِلَىٰ عَٰلِمِ ٱلْغَيْبِ وَٱلشَّهَٰدَةِ فَيُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٩٤﴾

95. Way idiin dhaaran markaad u gaddoontaan xaggooda inaad ka jeedsataan ee iskaga jeedsada iyagu waa wasakhe hoygooduna waa jahannamee waana ka abaal marin waxay kasbanayeen.

سَيَحْلِفُونَ بِٱللَّهِ لَكُمْ إِذَا ٱنقَلَبْتُمْ إِلَيْهِمْ لِتُعْرِضُوا۟ عَنْهُمْ ۖ فَأَعْرِضُوا۟ عَنْهُمْ ۖ إِنَّهُمْ رِجْسٌ ۖ وَمَأْوَىٰهُمْ جَهَنَّمُ جَزَآءًۢ بِمَا كَانُوا۟ يَكْسِبُونَ ﴿٩٥﴾

96. Way idiin dhaaran inaad ka raalli noqotaan, haddaad ka raalli noqotaan Alle kama raalli noqdo qoomka faasiqiinta ah.

يَحْلِفُونَ لَكُمْ لِتَرْضَوْا۟ عَنْهُمْ ۖ فَإِن تَرْضَوْا۟ عَنْهُمْ فَإِنَّ ٱللَّهَ لَا يَرْضَىٰ عَنِ ٱلْقَوْمِ ٱلْفَٰسِقِينَ ﴿٩٦﴾

Markay muslimiintii u baxeen dagaalkii iyo jahaadkii Tabuuk munaafiqiintii way iska hadheen iyagoo wax dana ah sheeg sheegan, markay muslimiintii ku soo noqdeen madiinana waxay billaabeen munaafiqiintii inay Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ay u cudurdaarani Allese waa og yahay dhaartooda beenta ah iyo cudurdaarkooda aan wax ka jirin oy ku dooni inay ku raalli galiyaan muslimiinta, waase kuwo xun oo gali naarta jahannamo, Alle na kama raalli aha camalkooda. Taasina waxay kuu adkeyn sidaan wax badan soo sheegnay inaan munaafiq, gaal, diin laawe iyo muslim waxba ka dhaxaynin isku ujeeddana ahayn, kala qaadeenna labo waddo oo kala duwan. **[At-Tawbah: 94-96].**

97. Reer baadiyahaa ugu daran gaalnimada iyo munaafaqnimada, mudanna inayna waxba ka ogayn xuduudda (soohdimaha) waxa Alle ku soo dejiyey Rasuulkiisa, Alle na waa oge fal san.

ٱلْأَعْرَابُ أَشَدُّ كُفْرًا وَنِفَاقًا وَأَجْدَرُ أَلَّا يَعْلَمُوا۟ حُدُودَ مَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ عَلَىٰ رَسُولِهِۦ ۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿٩٧﴾

98. Reer baadiyaha waxaa ka mida kuwo ka yeelan waxay bixin dayn bax oo kale, oo idin la sugi dhibaato, korkooda ha ahaato wareegga xumaanta, Alle na waa maqle og.

وَمِنَ ٱلْأَعْرَابِ مَن يَتَّخِذُ مَا يُنفِقُ مَغْرَمًا وَيَتَرَبَّصُ بِكُمُ ٱلدَّوَآئِرَ ۚ عَلَيْهِمْ دَآئِرَةُ ٱلسَّوْءِ ۗ وَٱللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٩٨﴾

وَمِنَ ٱلۡأَعۡرَابِ مَن يُؤۡمِنُ بِٱللَّهِ وَٱلۡيَوۡمِ ٱلۡأٓخِرِ وَيَتَّخِذُ مَا يُنفِقُ قُرُبَٰتٍ عِندَ ٱللَّهِ وَصَلَوَٰتِ ٱلرَّسُولِۚ أَلَآ إِنَّهَا قُرۡبَةٞ لَّهُمۡۚ سَيُدۡخِلُهُمُ ٱللَّهُ فِي رَحۡمَتِهِۦٓۚ إِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٞ رَّحِيمٞ ٩٩

99. Reer baadiyaha waxaa ka mida kuwa rumeyn Alle iyo maalinta aakhiro kana yeelan wuxuu bixin dhawaansho Alle agtiisa, iyo u ducaynta Rasuulka (ee uu u ducaynayo iyaga), taasi waa dhawaanshahooda, wuxuuna galin Alle naxariistiisa, illeen Alle waa dambi dhaafe naxariista.

Dadkii reer Madiina ma wada sinnayn isku midna ma aha, waxaa ka mid ahaa reer baadiyaha kuwo gaalnimada iyo munaafiqnimada ku fogaaday oo jaahiliina, iyo kuwo waxa la faray inay bixiyaan oo zaka ah iyo wixii la mida kala mid yeeli dayn gud oo kale oo culays ku yahay xumaanna la jecel muslimiinta, kuwaas balaayadu ha ku dhacdo. Waxaase ka mid ahaa reebaadiyihii madiina kuwo rumeeyey Alle, aakhiro, waxay bixinna ka yeelan sadaqo iyo dhawaansho Alle iyo in Rasuulku u duceeyo, waxayna u noqon sadaqo iyo u dhawaansho Alle, wuxuuna gelin Alle naxariistiisa. Saasayna u kala tageen muslim iyo munaafaq iyo gaal, muslim wuxuu mudan yahay liibaan, guul iyo naxariista Allaha awoodda leh. **[At-Tawbah: 97-99].**

وَٱلسَّٰبِقُونَ ٱلۡأَوَّلُونَ مِنَ ٱلۡمُهَٰجِرِينَ وَٱلۡأَنصَارِ وَٱلَّذِينَ ٱتَّبَعُوهُم بِإِحۡسَٰنٖ رَّضِيَ ٱللَّهُ عَنۡهُمۡ وَرَضُواْ عَنۡهُ وَأَعَدَّ لَهُمۡ جَنَّٰتٖ تَجۡرِي تَحۡتَهَا ٱلۡأَنۡهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدٗاۚ ذَٰلِكَ ٱلۡفَوۡزُ ٱلۡعَظِيمُ ١٠٠

100. Kuwii ku dheereeyey «khayrka» ee horreeyey oo ka mida muhaajiriinta iyo ansaar iyo kuwii ku raacay wanaagga Alle ayaa ka raalli noqday iyana way ka raalli noqdeen, wuxuuna u darbay jannooyin ay socoto dhexdeeda wabiyadii iyagoo ku waari waligood, taasina waa liibaan wayn.

وَمِمَّنۡ حَوۡلَكُم مِّنَ ٱلۡأَعۡرَابِ مُنَٰفِقُونَۖ وَمِنۡ أَهۡلِ ٱلۡمَدِينَةِ مَرَدُواْ عَلَى ٱلنِّفَاقِ لَا تَعۡلَمُهُمۡۖ نَحۡنُ نَعۡلَمُهُمۡۚ سَنُعَذِّبُهُم مَّرَّتَيۡنِ ثُمَّ يُرَدُّونَ إِلَىٰ عَذَابٍ عَظِيمٖ ١٠١

101. Dadka gaararkiinna deggan ee reebaadiyaha ah waxaa ka mida munaafiqiin, reer Madiinana waxaa ka mid ah (munaafiqiin), waxay ku madax taageen munaafaqnimo, ma ogidin annagaase og. Waxaannu

cadaabi labo jeer, markaasaa loo celin cadaab wayn.

102. Kuwo kalana waxay qirteen dambigooda, waxayna isku khaldeen camal fiican iyo mid kale oo xun, Alle wuxuu mudan yahay inuu ka toobad aqbalo, illeen Alle waa dambi dhaafe naxariista.

وَءَاخَرُونَ ٱعْتَرَفُوا۟ بِذُنُوبِهِمْ خَلَطُوا۟ عَمَلًا صَٰلِحًا وَءَاخَرَ سَيِّئًا عَسَى ٱللَّهُ أَن يَتُوبَ عَلَيْهِمْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٠٢﴾

Kuwii wanaagga ku horreeyey oo Muhaajiriintii iyo Ansaar ka mida iyo inta wanaagga ku raacda Alle ayaa ka raalli noqda, iyana way ka raalli noqdaan, wuxuuna u darbay jannooyin ay ku waari waligood, waana liibaanta u wayn, mar kale waxay aayaduhu ka warrameen in gaararka magaalada Madiina ahaayeen munaafiqiin, xataa magaalada dhexdeeda waxaa jiray kuwo ku dheeraaday munaafaqnimada dadkuse ma oga ee Alle umbaa og, wuxuuna u ciqaabi si daran, kuwo kale yaase jiray oo isku daray camal fiican iyo mid xun qirtayna dambigoodii mudanna in Alle u dambi dhaafo. Ruuxuna hadduu dambaabo waa inuu Alle si dhab ah ugu noqdaa uguna toobad keenaa. **[At-Tawbah: 100-102].**

103. Ka qaad xoolahooda xaggooda sadaqo (zakada) ood ku daahirin kuna nadiifin una ducee illeen ducadaadu waxay u noqon xasile, Alle na waa maqle og.

خُذْ مِنْ أَمْوَٰلِهِمْ صَدَقَةً تُطَهِّرُهُمْ وَتُزَكِّيهِم بِهَا وَصَلِّ عَلَيْهِمْ ۖ إِنَّ صَلَوٰتَكَ سَكَنٌ لَّهُمْ ۗ وَٱللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿١٠٣﴾

104. Miyayna ogayn in Alle ka aqbalo toobadda addoomadiisa kana qaado sadaqada (aqbalo) iyo in Alle yahay kan toobad aqbalka badan ee naxariista.

أَلَمْ يَعْلَمُوٓا۟ أَنَّ ٱللَّهَ هُوَ يَقْبَلُ ٱلتَّوْبَةَ عَنْ عِبَادِهِۦ وَيَأْخُذُ ٱلصَّدَقَٰتِ وَأَنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلتَّوَّابُ ٱلرَّحِيمُ ﴿١٠٤﴾

105. Waxaad dhahdaa camal fala wuu arki Alle camalkiinna iyo Rasuulkiisu iyo mu'miniintu waxaana la idiin celin xagga Allaha og waxa maqan iyo

وَقُلِ ٱعْمَلُوا۟ فَسَيَرَى ٱللَّهُ عَمَلَكُمْ وَرَسُولُهُۥ وَٱلْمُؤْمِنُونَ ۖ وَسَتُرَدُّونَ إِلَىٰ عَٰلِمِ ٱلْغَيْبِ وَٱلشَّهَٰدَةِ فَيُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿١٠٥﴾

waxa jooga idiinkana warrami (abaalmarin) waxaad falayseen.

106. Kuwo kalana waxaa dib loogu dhigay amarka Alle inuu cadaabo ama inuu ka toobad aqbalo, Alle na waa oge falsan.

وَءَاخَرُونَ مُرْجَوْنَ لِأَمْرِ ٱللَّهِ إِمَّا يُعَذِّبُهُمْ وَإِمَّا يَتُوبُ عَلَيْهِمْ ۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿١٠٦﴾

Alle wuxuu faray Rasuulkiisa (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu ka qaado xoolaha muslimiinta zako uu ku daahirin uguna ducayn, illeen ducadiisu waa xasiloonida muslimiintee, zakaduna ma aha wax la dhaafi karo ama la fudaydsan karo, Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu ahaa mid u duceeya ruuxii zako keena, sidii haweenaydii uu ku yidhi Alle ha u naxariisto adiga iyo ninkaagaba. Alle na wuxuu ka aqbalaa addoomadiisa sadaqaduu ka qaado, wax kastoo la fali waa la arki, waxaana dadka loo celin Allaha og waxa maqan iyo waxa jooga uu kana abaal marin, waxaana xadiith ku sugnaaday: haddii ruux camal ku falo dhagax aan albaab iyo daaqad lahayn wuxuu u muujin Alle dadka meeshuu doono ha ahaadee. Taasina waxay muujin naxariista Alle, adaygga sakada, ogaanshaha Alle wax walba, u ducaynta dadka sakada bixiya.

Aayadaha danbana waxay ka warrami dad dib uga dhacay duullaankii Tabuuk markay toobadkeeneenna xaalkoodii dib Alle u dhigay ugu danbayntiina Alle wuu ka aqbalay toobaddii illeen Alle waa naxariistee, inkastoy xun tahay in jahaadka laga hadho ama laga wahsado. **[At-Tawbah: 103-106].**

107. Waxaa ka mida kuwo u yeeshay masaajid, gaalnimo, kala goynta mu'miniinta iyo darbidda (iyo sugidda) cid la dagaallantay Alle iyo Rasuulkiisa mar hore, waxayna ku dhaaran inaannaan doonayn waxaan wanaag ahayn, Alle na waa og yahay (kana marag yahay) inay been sheegi.

وَٱلَّذِينَ ٱتَّخَذُوا۟ مَسْجِدًا ضِرَارًا وَكُفْرًا وَتَفْرِيقًۢا بَيْنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ وَإِرْصَادًا لِّمَنْ حَارَبَ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ مِن قَبْلُ ۚ وَلَيَحْلِفُنَّ إِنْ أَرَدْنَآ إِلَّا ٱلْحُسْنَىٰ ۖ وَٱللَّهُ يَشْهَدُ إِنَّهُمْ لَكَٰذِبُونَ ﴿١٠٧﴾

108. Ha joogsan dhexdiisa waligaa, masaajid lagu billaabay maalintii horaba dhawrsasho yaa mudan inaad joogsato dhexdiisa (masaajidka Nabiga iyo Quba) waxaa dhex jooga

لَا تَقُمْ فِيهِ أَبَدًا ۚ لَّمَسْجِدٌ أُسِّسَ عَلَى ٱلتَّقْوَىٰ مِنْ أَوَّلِ يَوْمٍ أَحَقُّ أَن تَقُومَ فِيهِ ۚ فِيهِ رِجَالٌ يُحِبُّونَ أَن يَتَطَهَّرُوا۟ ۚ وَٱللَّهُ يُحِبُّ ٱلْمُطَّهِّرِينَ ﴿١٠٨﴾

niman jecel inay is daahiriyaan Alle na wuu jecel yahay kuwa is daahiriya.

109. Ma ruux ku billaabay dhismihiisa ka dhawrsasho Alle iyo rajeyn raalli noqoshadiisa yaa khayr roon mise ruux ku billaabay dhismihiisa god dumi dhinaciis oo kula dhici naarta jahannamo Alle na ma hanuuniyo qoomka daalimiinta ah.

أَفَمَنْ أَسَّسَ بُنْيَٰنَهُۥ عَلَىٰ تَقْوَىٰ مِنَ ٱللَّهِ وَرِضْوَٰنٍ خَيْرٌ أَم مَّنْ أَسَّسَ بُنْيَٰنَهُۥ عَلَىٰ شَفَا جُرُفٍ هَارٍ فَٱنْهَارَ بِهِۦ فِى نَارِ جَهَنَّمَ ۗ وَٱللَّهُ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿١٠٩﴾

110. Kama tago dhismahooda ay dhiseen inuu ku jiro shaki quluubtooda, intay ka kala go'do «dhimatana» quluubtoodu, Alle na waa oge falsan.

لَا يَزَالُ بُنْيَٰنُهُمُ ٱلَّذِى بَنَوْا۟ رِيبَةً فِى قُلُوبِهِمْ إِلَّآ أَن تَقَطَّعَ قُلُوبُهُمْ ۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿١١٠﴾

Aayaduhu waxay soo dageen mar nin munaafaq ahaa oo dhib badnaa oo la dhihi jiray Abuu Caamir uu ka dhisay masaajidka Quba ee Madiina agtiisa dhismo uuna masaajid ku magacaabay si ciddii xumi ugu gabbato ama ugu shiraan dhibka muslimiinta, kuna kala geeyo muslimiinta. Alle na wuu ka reebay Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu ku tukado, illeen waxaa loo dhisay dhib muslim iyo gaalnimee iyo xumaane, waxaase mudan in lagu tukado masaajidka khayrka iyo wanaagga lagu billaabay markii horaba, dad nadiifa oo Alle jecel yahayna ku tukadaan, isku midna ma aha dhismo khayr iyo dhismo shar oo dumi oo jahannamo ku ridi ciddii dhista, oo shaki, munaafaqnimo iyo xumaan beeri, halkaasna waxaa kaaga muuqda xumaanta kala gaynta muslimiinta haba lagu kala geeyo magac khayr u muuqdee, sida masaajidka iyo waxyaabo kale, waxaase fiican oo waajiba isku duubnida muslimiinta. **[At-Tawbah: 107-110].**

111. Alle wuxuu kaga gatay mu'miniinta naftooda iyo xoolahooda inay janno u ahaato iyagoo ku dagaallami jidka Alle oy waxna dili iyana la dili, waana yabooh ku sugan (dhaba) Tawreed iyo Injiil iyo Quraanka, yaa ka

۞ إِنَّ ٱللَّهَ ٱشْتَرَىٰ مِنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ أَنفُسَهُمْ وَأَمْوَٰلَهُم بِأَنَّ لَهُمُ ٱلْجَنَّةَ ۚ يُقَٰتِلُونَ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ فَيَقْتُلُونَ وَيُقْتَلُونَ ۖ وَعْدًا عَلَيْهِ حَقًّا فِى ٱلتَّوْرَىٰةِ وَٱلْإِنجِيلِ وَٱلْقُرْءَانِ ۚ وَمَنْ أَوْفَىٰ بِعَهْدِهِۦ

مِنَ ٱللَّهِۚ فَٱسْتَبْشِرُواْ بِبَيْعِكُمُ ٱلَّذِي بَايَعْتُم بِهِۦۚ وَذَٰلِكَ هُوَ ٱلْفَوْزُ ٱلْعَظِيمُ ﴿١١١﴾

oofin badan ballankiisa Alle, ku bishaaraysta gadiddii ood gaddeen, kaasina waa uun liibaanta wayn.

ٱلتَّٰٓئِبُونَ ٱلْعَٰبِدُونَ ٱلْحَٰمِدُونَ ٱلسَّٰٓئِحُونَ ٱلرَّٰكِعُونَ ٱلسَّٰجِدُونَ ٱلْأٓمِرُونَ بِٱلْمَعْرُوفِ وَٱلنَّاهُونَ عَنِ ٱلْمُنكَرِ وَٱلْحَٰفِظُونَ لِحُدُودِ ٱللَّهِۗ وَبَشِّرِ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١١٢﴾

112. Waa kuwa toobadkeena, ee caabuda (Alle) ee mahdiya, ee saa'ixiinta ah (sooma ama jahaada) ee rukuuca ee sujuuda, ee fara wanaagga reebana xumaanta, ee dhawra xuduudda Alle, ee u bishaaree mu'miniinta.

Alle waa naxariis badan yahay, isagaa abuuray dad, xoolaha, isagaana leh oo hanta naftooda, iyo xoolahooda, iyo jannaba, haddana kaga gatay mu'miniinta naftooda iyo xoolahooda janno, hadday jahaadaan oy xaqa daafacaan, ama wax ha dileen ama iyaga ha la dilee, waana yabooh adag oo Alle ku yaboohay tawreed, injiil, iyo quraanka, wax Alle ka oofin badan ballanna ma jiro, ee ciddii ballan ka qaada ha ku bishaaraysato iibkooda ah, liibaanta u wayn, kuwaasuna waa kuwa toobadkeena, ee Ilaah caabuda, ee mahdiya, ee sooma, jahaadana khayrkana u socdaala, ee salaadda ku dadaala, samahana fara, xumaantana reeba, dhawrana xuduudda Alle, waana loo bishaareeyey mu'miniinta. Aayaduhuna waxay muujin qiimaha jahaadka, naxariista Alle, sharafta iyo wanaagga mu'miniinta, faridda wanaagga, reebidda xumaanta iyo bishaarada mu'miniinta. **[At-Tawbah: 111-112].**

مَا كَانَ لِلنَّبِيِّ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ أَن يَسْتَغْفِرُواْ لِلْمُشْرِكِينَ وَلَوْ كَانُوٓاْ أُوْلِي قُرْبَىٰ مِنۢ بَعْدِ مَا تَبَيَّنَ لَهُمْ أَنَّهُمْ أَصْحَٰبُ ٱلْجَحِيمِ ﴿١١٣﴾

113. Kuma habboona Nabiga iyo kuwa rumeeyey (xaqa) inay u dambi dhaaf warsadaan mushrikiinta «gaalada» haba ahaadeen qaraabadoodee intay u caddaatay kadib inay ehelka naarta jaxiima yihiin.

وَمَا كَانَ ٱسْتِغْفَارُ إِبْرَٰهِيمَ لِأَبِيهِ إِلَّا عَن مَّوْعِدَةٍ وَعَدَهَآ إِيَّاهُ فَلَمَّا تَبَيَّنَ لَهُۥٓ أَنَّهُۥ عَدُوٌّ لِّلَّهِ تَبَرَّأَ مِنْهُۚ

114. Ma ahayn u dambi dhaaf doonidii Nabi Ibraahim aabihiis ballan uu u yaboohay mooyee, markayse u caddaatay inuu

col Alle yahay wuu iska bari yeelay xaggiisa, (Nabi) Ibraahim wuxuu ahaa duco (baryo) badanaha (Alle) oo dul badan.

إِنَّ إِبْرَٰهِيمَ لَأَوَّٰهٌ حَلِيمٌ ﴿١١٤﴾

115. Alle na ma aha mid dhumiya qoom intuu hanuuniyey ka dib intuu uga cadddeeyo waxay ka dhowrsadaan, Alle na wax kasta waa og yahay.

وَمَا كَانَ ٱللَّهُ لِيُضِلَّ قَوْمًۢا بَعْدَ إِذْ هَدَىٰهُمْ حَتَّىٰ يُبَيِّنَ لَهُم مَّا يَتَّقُونَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمٌ ﴿١١٥﴾

116. Alle na waxaa u sugnaaday xukunka samooyinka iyo dhulka isagaana wax nooleeya waxna dila, isagana wax ka soo hadhay oo wali ah ama gargaara ah ma lehidiin.

إِنَّ ٱللَّهَ لَهُۥ مُلْكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۖ يُحْىِۦ وَيُمِيتُ ۚ وَمَا لَكُم مِّن دُونِ ٱللَّهِ مِن وَلِىٍّ وَلَا نَصِيرٍ ﴿١١٦﴾

Geeridii Abu Dhaalib yey soo degtay aayaddu, wuxuuna Alle reebay in loo dambi dhaaf warsado cid ku dhimatay waxaan islaamka ahayn qaraababa ha ahaatee, mar hadday caddaato inay naarta ehelkeeda noqon, Nabi Ibraahimse wuxuu uun u yaboohay aabihiis inuu u dambi dhaaf warsan markayse u caddaatay inuu col Alle yahay wuu iska bari yeelay illeen Nabi Ibraahim wuxuu ahaa toobad keen badane dulsan.

Caddaaladda Alle na waxaa ka mida inuusan cidna dhuminnin isagoon u caddaynin waxa xaqa ah oy ku dhawrasadaan, illeen wax walba wuu ogyahaye, wuxuuna leeyahay xukunka samooyinka iyo dhulka, waxna waa dilaa waxna nooleeyaa, wax ka soo hadhay oo gargaarina ma jiro.

Taasina waxay muujin awoodda Alle iyo inaan cidna isku hallayn wanaagga cid kale iyo inaan jacayl cidna lagu hanuunin karin. **[At-Tawbah: 113-116].**

117. Wuxuu Alle ka toobad aqbalay Nabiga, Muhaajiriinta iyo Ansaartii raacday saacaddii cidhiidhiga intay u dhawaatay inay iilato quluub koox ka mida ka dib, markaasuu ka toobad aqbalay, illeen waa u turaha u naxariistee.

لَّقَد تَّابَ ٱللَّهُ عَلَى ٱلنَّبِىِّ وَٱلْمُهَٰجِرِينَ وَٱلْأَنصَارِ ٱلَّذِينَ ٱتَّبَعُوهُ فِى سَاعَةِ ٱلْعُسْرَةِ مِنۢ بَعْدِ مَا كَادَ يَزِيغُ قُلُوبُ فَرِيقٍ مِّنْهُمْ ثُمَّ تَابَ عَلَيْهِمْ ۚ إِنَّهُۥ بِهِمْ رَءُوفٌ رَّحِيمٌ ﴿١١٧﴾

118. Saddexdiina wuu (ka toobad aqbalay) la dib mariyey intuu kaga cidhiidhyamo dhulku isagoo waasac ah, kuna cidhiidyantay naftoodu una maleeyeen (yaqiinsadeen) inayna jirin meel la magan galo oon Alle ahayn, markaas Alle ka toobad aqbalay inay toobadkeenaan, Alle na waa toobad aqbale naxariista.

وَعَلَى ٱلثَّلَٰثَةِ ٱلَّذِينَ خُلِّفُواْ حَتَّىٰٓ إِذَا ضَاقَتۡ عَلَيۡهِمُ ٱلۡأَرۡضُ بِمَا رَحُبَتۡ وَضَاقَتۡ عَلَيۡهِمۡ أَنفُسُهُمۡ وَظَنُّوٓاْ أَن لَّا مَلۡجَأَ مِنَ ٱللَّهِ إِلَّآ إِلَيۡهِ ثُمَّ تَابَ عَلَيۡهِمۡ لِيَتُوبُوٓاْۚ إِنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلتَّوَّابُ ٱلرَّحِيمُ ١١٨

119. Kuwa xaqa rumeeyow ka dhawrsada Alle noqdana la jirka kuwa runta badan.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱتَّقُواْ ٱللَّهَ وَكُونُواْ مَعَ ٱلصَّٰدِقِينَ ١١٩

Aayadahani waxay ku soo degeen duullaankii Tabuuk, wuxuuna ahaa waqti aad u daran oo kulul, oo socdaal dheer, illeen madiina iyo tabuuk waa kala dheer yihiin marka lug lagu socdee, wuxuuna Alle waafajiyey wanaagga Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) iyo Muhaajiriintii iyo Ansaartii raacday saacaddii dhibka markay u dhawaatay in quluub dad badan iilato oo leexato Allese ka toobad aqbalay illeen waa u turaha naxariistee.

Saddexdii la dib mariyeyna Alle ayaa ka toobad aqbalay oo kala ahaa: Kacab binu Maalik, Muraaro Binu Rabiic iyo Hilaal binu Umayata, waxayna ahaayeen niman fiicane markaas umbay naftoodu sirtay wayse run sheegeen, Alle na waa ka toobad aqbalay, markay naftoodii la cidhiidhyantay, dhulkuna ku yaraaday isna neceen, waxaana lala hadlin kontan maalmood wax ku dhaw, arrintaasuna waxay caddayn in jahaadka loo darbado loona baxo markuu waajibo, in runta la sheego laguna socdo, Alle na lagu xidhnaado, loona toobad keeno, kuwa runta sheega ee fala lala jiro, muslimiintana aan la khayaamin, lana guntin furin iyo in la edbiyo ciddiii fasha waxyaalaha kala guntin fura muslimiinta. **[At-Tawbah: 117-119].**

120. Kuma habboona (uma bannaana) reer Madiino iyo kuwa gaararkeeda ah oo baadiyaha carbeeda inay ka gadaal maraan Rasuulka Alle oy kana jeclaadaan naftooda naftiisa, illeen wixii ku dhaca

مَا كَانَ لِأَهۡلِ ٱلۡمَدِينَةِ وَمَنۡ حَوۡلَهُم مِّنَ ٱلۡأَعۡرَابِ أَن يَتَخَلَّفُواْ عَن رَّسُولِ ٱللَّهِ وَلَا يَرۡغَبُواْ بِأَنفُسِهِمۡ عَن نَّفۡسِهِۦۚ ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمۡ لَا يُصِيبُهُمۡ ظَمَأٞ وَلَا نَصَبٞ وَلَا مَخۡمَصَةٞ فِي سَبِيلِ ٱللَّهِ

oo oona, ama dhiba ama gaajo ah jidka Alle dhexdiisa ama meeshey ku joogsadaan oo cadho galin gaalada iyo waxay gaadhsiiyaan colka (dhammaan) waxaa loogu dhigi camal suubban, Alle na ma halleeyo ajirka samo falayaasha.

وَلَا يَطَـُٔونَ مَوۡطِئٗا يَغِيظُ ٱلۡكُفَّارَ وَلَا يَنَالُونَ مِنۡ عَدُوّٖ نَّيۡلًا إِلَّا كُتِبَ لَهُم بِهِۦ عَمَلٞ صَٰلِحٌۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُضِيعُ أَجۡرَ ٱلۡمُحۡسِنِينَ ١٢٠

121. Waxay bixiyaan oo yar ama wayn iyo toggay gooyaanna waa loo qori inuu ka abaal mariyo Alle wanaagga waxay falayeen.

وَلَا يُنفِقُونَ نَفَقَةٗ صَغِيرَةٗ وَلَا كَبِيرَةٗ وَلَا يَقۡطَعُونَ وَادِيًا إِلَّا كُتِبَ لَهُمۡ لِيَجۡزِيَهُمُ ٱللَّهُ أَحۡسَنَ مَا كَانُواْ يَعۡمَلُونَ ١٢١

122. Mana aha inay mu'miniinta oo dhan baxaan, ee may koox kastaba qaar ka baxdo inay diinta kasaan, una digaan dadkooda markay u soo noqdaan waxay u dhawdahay inay digtoonaadaane.

۞ وَمَا كَانَ ٱلۡمُؤۡمِنُونَ لِيَنفِرُواْ كَآفَّةٗۚ فَلَوۡلَا نَفَرَ مِن كُلِّ فِرۡقَةٖ مِّنۡهُمۡ طَآئِفَةٞ لِّيَتَفَقَّهُواْ فِي ٱلدِّينِ وَلِيُنذِرُواْ قَوۡمَهُمۡ إِذَا رَجَعُوٓاْ إِلَيۡهِمۡ لَعَلَّهُمۡ يَحۡذَرُونَ ١٢٢

Aayadahanna wuxuu Alle ku caddayn inayna ku habboonayn reer madiino iyo kuwa dagan gaararkeeda inay ka gadaal maraan Rasuulka markuu jahaadka u baxo, kana jeclaadaan naftooda naftiisa, wixiise lagala kulmo jidka Alle oo ah oon, dhib, gaajo ama meel kasta oo la maro oo gaalada ka cadhaysa ama wixii dhiba oo gaalada lagala kulmo wuxuu Alle ugu qori camal fiican, Alle na ma halleeyo ajir iyo wanaag cidda fasho, sidoo kale wixii bixina ama ha yaraato ama ha waynaato iyo toggay gooyaan waxaa loogu qori ajirka u wanaagsan, mana aha inaan cidna magaalada ku hadhin ee jahaad loo wada baxo ee waa in si nidaama iyo qorsha ah qaarna u baxaan qaarna u maamulaan dadka iyo magaalada si ciddii baxday markay soo noqoto ay dadka wax ugu faa'iideeyaan, taasina waxay ku tusin in diinta islaamku tahay diin nidaam. **[At-Tawbah: 120-122].**

123. Kuwa xaqa rumeeyow la dagaallama kuwa idinla xidhiidha ee gaalada ah, hana

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ قَٰتِلُواْ ٱلَّذِينَ يَلُونَكُم مِّنَ ٱلۡكُفَّارِ وَلۡيَجِدُواْ فِيكُمۡ

غِلْظَةً ۚ وَٱعْلَمُوٓا۟ أَنَّ ٱللَّهَ مَعَ ٱلْمُتَّقِينَ ﴿١٢٣﴾

idinka heleen adayg, ogaadana in Alle la jiro kuwa dhawrsada.

وَإِذَا مَآ أُنزِلَتْ سُورَةٌ فَمِنْهُم مَّن يَقُولُ أَيُّكُمْ زَادَتْهُ هَٰذِهِۦٓ إِيمَٰنًا ۚ فَأَمَّا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ فَزَادَتْهُمْ إِيمَٰنًا وَهُمْ يَسْتَبْشِرُونَ ﴿١٢٤﴾

124. Marka la soo dejiyo suurad waxaa ka mida kuwo (munaafiqiina) oo dhihi kiinnay u kordhisay iimaan, kuwa xaqa rumeeyeyse waxay u kordhisay iimaan iyagoo bishaaraysan.

وَأَمَّا ٱلَّذِينَ فِى قُلُوبِهِم مَّرَضٌ فَزَادَتْهُمْ رِجْسًا إِلَىٰ رِجْسِهِمْ وَمَاتُوا۟ وَهُمْ كَٰفِرُونَ ﴿١٢٥﴾

125. Kuwa qulquubta ka bukase waxay u kordhisaa xumaan xumaantoodii (kale), wayna dhintaan iyagoo gaalo ah.

أَوَلَا يَرَوْنَ أَنَّهُمْ يُفْتَنُونَ فِى كُلِّ عَامٍ مَّرَّةً أَوْ مَرَّتَيْنِ ثُمَّ لَا يَتُوبُونَ وَلَا هُمْ يَذَّكَّرُونَ ﴿١٢٦﴾

126. Miyeyna arkayn in la imtixaamo sanad kasta hal jeer ama labo jeer markaas ayan toobad keenin xusuusanaynna.

وَإِذَا مَآ أُنزِلَتْ سُورَةٌ نَّظَرَ بَعْضُهُمْ إِلَىٰ بَعْضٍ هَلْ يَرَىٰكُم مِّنْ أَحَدٍ ثُمَّ ٱنصَرَفُوا۟ ۚ صَرَفَ ٱللَّهُ قُلُوبَهُم بِأَنَّهُمْ قَوْمٌ لَّا يَفْقَهُونَ ﴿١٢٧﴾

127. Marka la soo dejiyo suurad way dayaan munafiqiinta qaarkood qaar waxayna isdhahaan ruuxna maydin arkaa markaasay gaddoomaan, Alle ha iilo quluubtooda illeen waa kuwo aan wax kasayn.

لَقَدْ جَآءَكُمْ رَسُولٌ مِّنْ أَنفُسِكُمْ عَزِيزٌ عَلَيْهِ مَا عَنِتُّمْ حَرِيصٌ عَلَيْكُم بِٱلْمُؤْمِنِينَ رَءُوفٌ رَّحِيمٌ ﴿١٢٨﴾

128. Waxaa idiin yimid Rasuul idinka mida oyna ku daran tahay waxa idin dhiba, idin kuna dadaali, una turid iyo naxariis badan mu'miniinta.

فَإِن تَوَلَّوْا۟ فَقُلْ حَسْبِىَ ٱللَّهُ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ۖ عَلَيْهِ تَوَكَّلْتُ ۖ وَهُوَ رَبُّ ٱلْعَرْشِ ٱلْعَظِيمِ ﴿١٢٩﴾

129. Haddayse jeedsadaan dadku waxaad dhahdaa ka igu filanu waa Ilaahay, Alle mooyee ilaah cibaado mudan ma jiro, isagaanan talo saartay, waana Rabbiga carshiga wayn.

Aayadda hore waxay fari in lala jahaado gaalada la dariska ah muslimiinta illeen dhib iyo xumaan lagama waayee, oy kuna ogaadaan muslimiinta adayg iyo xoog, illeen Alle ayaa la jiree, tan kale waxay ka warrami munaafiqiintii marka quraanku soo dego is warsan jiray ruuxuu wax rumayna u kordhiyey, mu'miniintase waxaa u kordha iimaan koodii hore ka sokow, munaafiqiintuse cudur iyo xumaan yey kororsadaan, iyagoo gaalo ah yeyna dhintaan, kumana waana qaataan imtixaamka had iyo jeer, wayna cararaan oo dusaan marka quraan la soo dejiyo illeen qalbigoodaa Alle iilay waxna ma kasayaane, wuxuuna Alle u soo diray muslimiinta Rasuul ka mida oo wanaaggooda jecel xumaantoodana neceb, una dadaala mu'miniinta, una naxariis badan, ciddiise xaqa ka jeedsata waxba kama saarra, illeen Alle ayaa kaafiyee, isaga mooyee ku cibaado mutay ma jiro, lana talo saaran, lehna awoodda iyo carshiga wayn, saasayna ku dhammaatay suuraddii iyadoo caddaysay wax badan oo ah jihaad, wax bixin, ballanka, munaafiqiin, iyo inuu Rasuulku yahay naxariis loo soo diray caalamka khayrna la jecel. **[At-Tawbah: 123-129].**

Suurat Yuunus

سُورَةُ يُونُسَ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

الٓرۚ تِلۡكَ ءَايَٰتُ ٱلۡكِتَٰبِ ٱلۡحَكِيمِ ١

1. Kalimada hore waxay ku tusin mucjisada quraanka, taasina waa aayaadka kitaabka falkasan.

أَكَانَ لِلنَّاسِ عَجَبًا أَنۡ أَوۡحَيۡنَآ إِلَىٰ رَجُلٖ مِّنۡهُمۡ أَنۡ أَنذِرِ ٱلنَّاسَ وَبَشِّرِ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ أَنَّ لَهُمۡ قَدَمَ صِدۡقٍ عِندَ رَبِّهِمۡۗ قَالَ ٱلۡكَٰفِرُونَ إِنَّ هَٰذَا لَسَٰحِرٞ مُّبِينٌ ٢

2. Dadka ma waxaa la yaab ku noqotay inaan u waxyoon nin ka mida u dig dadka, uguna bishaaree kuwa rumeeyey inay ku leeyihiin abaalmarin fiican Rabbigood agtiisa (camalkoodii dartiis), waxay dheheen gaaladiina kani waa sixirrow cad.

إِنَّ رَبَّكُمُ ٱللَّهُ ٱلَّذِي خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضَ فِي سِتَّةِ أَيَّامٖ ثُمَّ ٱسۡتَوَىٰ عَلَى ٱلۡعَرۡشِۖ يُدَبِّرُ ٱلۡأَمۡرَۖ مَا مِن شَفِيعٍ إِلَّا مِنۢ بَعۡدِ إِذۡنِهِۦۚ ذَٰلِكُمُ ٱللَّهُ رَبُّكُمۡ فَٱعۡبُدُوهُۚ أَفَلَا تَذَكَّرُونَ ٣

3. Allihiin waa ka ku abuuray samooyinka iyo dhulka lix maalmood markaas ka kor noqday carshiga, isagaana maamula amarka, wax shafeecina idinkiisa la'aantiisa ma jiro, kaasi waa Rabbigiinna idin barbaariya ee caabuda, miyeydaan wax xusuusanayn.

Quraanka waxaa ku dhan xigmo iyo sharaf, gaaladuna waxay la yaabeen in ruux ka mida lagu soo dejiyo waxyi inuu u digo dadka una bishaareeyo kuwa xaqa rumeeyey ee wanaag ku leh Alle agtiisa, gaaladuna waxay ku sheegeen Nabiga in uu saaxir yahay, Rabbiga xaqa ahna waa kan abuuray cirka iyo dhulka isagoo awood, sharaf iyo qudraba u dhammeystiran yihiin, isagaa wax maamula, wax shafeeci kara idinkiisa la'antiisna ma jiro, isagaana mudan in la caabudo.

Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: markuu Alle bixiyey Nabiga Muxamada (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) yey beeniyeen carabtu iyagoo sheegi in Alle ka wayn yahay inuu soo diro Nabi dada, markaasaa Alle soo dejiyey aayadda. Taasina waa doqonnimadii iyo madax adaygoodii, maxaa yeelay dad waa in uun dad loo soo diro si uu u toosiyo. **[Yuunus: 1-3].**

إِلَيْهِ مَرْجِعُكُمْ جَمِيعًا ۖ وَعْدَ ٱللَّهِ حَقًّا ۚ إِنَّهُۥ يَبْدَؤُا۟ ٱلْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُۥ لِيَجْزِىَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ بِٱلْقِسْطِ ۚ وَٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ لَهُمْ شَرَابٌ مِّنْ حَمِيمٍ وَعَذَابٌ أَلِيمٌۢ بِمَا كَانُوا۟ يَكْفُرُونَ ﴿٤﴾

4. Xaggiisaa laydiin celin dhammaan, yabooha Alle na waa xaq, Alle ayaa billaaba abuurka haddana soo celin inuu ku abaal mariyo kuwa rumeeyey (xaqa) oo falay camal fiican, si caddaalada, kuwa gaaloobayna waxaa u sugnaaday cabbid kulul iyo cadaab daran gaalnimadooda darteed.

هُوَ ٱلَّذِى جَعَلَ ٱلشَّمْسَ ضِيَآءً وَٱلْقَمَرَ نُورًا وَقَدَّرَهُۥ مَنَازِلَ لِتَعْلَمُوا۟ عَدَدَ ٱلسِّنِينَ وَٱلْحِسَابَ ۚ مَا خَلَقَ ٱللَّهُ ذَٰلِكَ إِلَّا بِٱلْحَقِّ ۚ يُفَصِّلُ ٱلْءَايَٰتِ لِقَوْمٍ يَعْلَمُونَ ﴿٥﴾

5. Alle waa kan ka yeelay qorraxda ifid dayaxana nuur una qaddaray meelo ay socdaan, inaad ogaataan tirada sanooyinka iyo xisaabta, wuxuu u abuuray Alle arrintaas xaq, wuxuuna u caddayn aayaadka ciddii wax og.

إِنَّ فِى ٱخْتِلَٰفِ ٱلَّيْلِ وَٱلنَّهَارِ وَمَا خَلَقَ ٱللَّهُ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ لَءَايَٰتٍ لِّقَوْمٍ يَتَّقُونَ ﴿٦﴾

6. Isbadalka habeenka iyo maalinta iyo abuurka Alle ee samooyinka iyo dhulka aayaad baa ugu sugan ciddii dhawrsan.

Xagga Alle ayaa loo noqon dhammaan yabooha Alle na waa dhab oo ah in si caddalada loogu abaal mariyo kuwa wanaagga falay janno, kuwa gaaloobayna cadaab daran. Alle na waa ka dadka ugu nicmeeyey qorraxda ifi iyo dayaxa nuuri si waqtiga iyo xisaabta loogu garto, habeenka iyo dharaarta isbaddelkeedana iyo abuurka cirka iyo dhulka waxaa ku sugan calaamooyin muujin xaqnimada Alle iyo awooddiisa, ciddii caqli leh oo Alle nuur u geliyey qalbiga wuxuu yaqiinsan waynida awoodda Allaha abuuray cirka, dhulka, qorraxda, dayaxa iyo khalqiga kalaba mudanna in la caabudo. **[Yuunus: 4-6].**

إِنَّ ٱلَّذِينَ لَا يَرۡجُونَ لِقَآءَنَا وَرَضُواْ بِٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَا وَٱطۡمَأَنُّواْ بِهَا وَٱلَّذِينَ هُمۡ عَنۡ ءَايَٰتِنَا غَٰفِلُونَ ٧

7. Kuwaan rajaynayn la kulanka naga kuna raalli noqday nolosha dhaw kuna xasilay iyo kuwa halmaansan aayaadkannaga.

أُوْلَٰٓئِكَ مَأۡوَىٰهُمُ ٱلنَّارُ بِمَا كَانُواْ يَكۡسِبُونَ ٨

8. Kuwaas hooygoodu waa naar waxay kasbanayeen darteed.

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ يَهۡدِيهِمۡ رَبُّهُم بِإِيمَٰنِهِمۡۖ تَجۡرِي مِن تَحۡتِهِمُ ٱلۡأَنۡهَٰرُ فِي جَنَّٰتِ ٱلنَّعِيمِ ٩

9. Kuwa rumeeyey xaqa oo falay camal wanaagsan wuxuu ku hanuunin Rabbigood (jidadka jannada) iimaankooda sababtii (oo nuur ayuu siin), waxaana socon (guryahooda) hoostooda wabiyadii, jannooyinka naciimo dhexdeeda iyagoo ku sugan.

دَعۡوَىٰهُمۡ فِيهَا سُبۡحَٰنَكَ ٱللَّهُمَّ وَتَحِيَّتُهُمۡ فِيهَا سَلَٰمٞۚ وَءَاخِرُ دَعۡوَىٰهُمۡ أَنِ ٱلۡحَمۡدُ لِلَّهِ رَبِّ ٱلۡعَٰلَمِينَ ١٠

10. Yeedhidooduna dhexdeeda waa Allow waad nasahan tahay, bariidadooduna waa (nabadgalyo) salaan, ducadoodana waxaa ugu dambayn mahad ilaah baa leh Rabbiga caalamka ah.

* وَلَوۡ يُعَجِّلُ ٱللَّهُ لِلنَّاسِ ٱلشَّرَّ ٱسۡتِعۡجَالَهُم بِٱلۡخَيۡرِ لَقُضِيَ إِلَيۡهِمۡ أَجَلُهُمۡۖ فَنَذَرُ ٱلَّذِينَ لَا يَرۡجُونَ لِقَآءَنَا فِي طُغۡيَٰنِهِمۡ يَعۡمَهُونَ ١١

11. Hadduu Alle u dedejiyo dadka xumaanta siday khayrka u dedejistaan waxaa loo dhammayn lahaa ajashooda, waanuse ku dayn kuwaan rajaynayn la kulankannaga fasaadkooda iyagoo ku wareersan.

Wuxuu Alle kaga warramay aayadahan xaalka kuwaan Alle la kulankiisa rajaynayn, oo adduunyada ka raalli noqday, kuna xasilay, halmaamayna aayaadka Alle ee naari u sugnaatay, iyo kuwa rumeeyey xaqa wanaaggana falay oo uu Alle iimaankooda dartii ku hanuunin jannada, nicmadeedana ku waari, hadalkooduna yahay xuska Alle iyo salaan iyo mahad Alle, waana labo kooxood oo kala fog, oo midna khasaaray midna liibaanay.

Tan kale hadduu Alle ugu dedejiyo dadka xumaanta sida khayr waa la dhammayn lahaa, wuxuuse u dayn daalimiinta xumaanta iyagoo ku indha la', mana ku habboona ruux caqli leh inuu dedejisto shar iyo xumaan, waxaana xadiith ah: naftiinna, caruurtiinna iyo xoolihiinna ha habaarina ood waafaqdaan saacad ijaabo oo laydinka aqbalo. **[Yuunus: 7-11].**

12. Markuu taabto dadka dhib wuu na baryayaa isagoo jiifa, ama fadhiya ama taagan, markaan ka faydno dhibkana wuu iska socdaa sidii isagoon noo baryinba dhibkii taabtay, saasaa loogu qurxiyey xadgudbayaasha waxay falayeen.

وَإِذَا مَسَّ ٱلْإِنسَٰنَ ٱلضُّرُّ دَعَانَا لِجَنۢبِهِۦٓ أَوْ قَاعِدًا أَوْ قَآئِمًا فَلَمَّا كَشَفْنَا عَنْهُ ضُرَّهُۥ مَرَّ كَأَن لَّمْ يَدْعُنَآ إِلَىٰ ضُرٍّ مَّسَّهُۥ ۚ كَذَٰلِكَ زُيِّنَ لِلْمُسْرِفِينَ مَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿١٢﴾

13. Waxaan halaagnay quruumo idinka horreeyey markay dulmi faleen, waxayna ula timid rasuulladoodii xujooyin, mana ayan rumeynayn, saasaana ku abaal marinnaa qoomka dambiilayaasha ah.

وَلَقَدْ أَهْلَكْنَا ٱلْقُرُونَ مِن قَبْلِكُمْ لَمَّا ظَلَمُوا۟ وَجَآءَتْهُمْ رُسُلُهُم بِٱلْبَيِّنَٰتِ وَمَا كَانُوا۟ لِيُؤْمِنُوا۟ ۚ كَذَٰلِكَ نَجْزِى ٱلْقَوْمَ ٱلْمُجْرِمِينَ ﴿١٣﴾

14. Markaasaan idinka yeellay kuwo u hadha dhulka gadaashood inaan eegno sidaad fashaan.

ثُمَّ جَعَلْنَٰكُمْ خَلَٰٓئِفَ فِى ٱلْأَرْضِ مِنۢ بَعْدِهِمْ لِنَنظُرَ كَيْفَ تَعْمَلُونَ ﴿١٤﴾

Waxaa dadka dabeecaddiisa ka mida in markuu bukoodo ama dhib taabto uu Alle baryaa isagoo jiifa ama fadhiya ama taagan, markuuse ka faydo dhibka uu iska dhaqaaqo isagoo gaalnimadii ku sii dhex jira sidii isagoon dhib taaban ama aan Alle horay u baryin, saasna waxaa loo qurxiyey xad gudbayaasha, wuxuuna Alle halaagay ummado ka horreeyey gaaladaas markay dulmi faleen iyagooy rasuulladoodii ula yimaadeen xujooyin oyna beeniyeen, saasuuna Alle ku abaal mariyaa dambiilayaasha, idinkana laydiinku reebay dhulka gadaashood imtixaan iyo in Alle eego isagoo og waxa la falo. Waxaana xadiith ah: adduunyadu waa macaan tahay waana cagaaran tahay, Alle ayaana idinku reebay inuu eego waxaad fashaan, ee iska jira addunyada iyo haweenka. **[Yuunus: 12-14].**

15. Marka lagu akhriyo korkooda aayaadkannaga oo cad cad waxay dhahaan kuwaan

وَإِذَا تُتْلَىٰ عَلَيْهِمْ ءَايَاتُنَا بَيِّنَٰتٍ قَالَ ٱلَّذِينَ لَا يَرْجُونَ لِقَآءَنَا ٱئْتِ بِقُرْءَانٍ

غَيۡرِ هَٰذَآ أَوۡ بَدِّلۡهُۚ قُلۡ مَا يَكُونُ لِيٓ أَنۡ أُبَدِّلَهُۥ مِن تِلۡقَآيِٕ نَفۡسِيٓۖ إِنۡ أَتَّبِعُ إِلَّا مَا يُوحَىٰٓ إِلَيَّۖ إِنِّيٓ أَخَافُ إِنۡ عَصَيۡتُ رَبِّي عَذَابَ يَوۡمٍ عَظِيمٖ ١٥

rajaynayn la kulankannaga: noo keen quraan aan kan ahayn ama baddal, waxaad dhahdaa igama suurowdo inaan ka baddalo agtayda, waxaan uun raaci waxa lay waxyoodo, waxaan ka cabsan haddaan Alle caasiyo cadaab maalin wayn.

قُل لَّوۡ شَآءَ ٱللَّهُ مَا تَلَوۡتُهُۥ عَلَيۡكُمۡ وَلَآ أَدۡرَىٰكُم بِهِۦۖ فَقَدۡ لَبِثۡتُ فِيكُمۡ عُمُرٗا مِّن قَبۡلِهِۦٓۚ أَفَلَا تَعۡقِلُونَ ١٦

16. Waxaad dhahdaa hadduu doono Alle idinkuma akhriyeen idinmana ogaysiiyeen isaga, waxaan ku nagaaday dhexdiinna ka hor cimri ee miyeydaan wax kasayn.

فَمَنۡ أَظۡلَمُ مِمَّنِ ٱفۡتَرَىٰ عَلَى ٱللَّهِ كَذِبًا أَوۡ كَذَّبَ بِـَٔايَٰتِهِۦٓۚ إِنَّهُۥ لَا يُفۡلِحُ ٱلۡمُجۡرِمُونَ ١٧

17. Yaa ka dulmi badan cid ku been abuuratay Alle ama beeniyey aayaadkiisa, illeen ma liibaanaan dambiilayaal.

Gaaladii Qureesheed ee Makaad waxay Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) marba wax warsadaan oo xaqa ka jeedsadaanba waxay warsadeen inuu keeno quraan kale oo aan kan ahayn, ama quraanka wax ka baddalo, markaasuu Alle ku celiyey oo faray Nabiga inuu ku dhaho: iima suurowdo inaan baddalo, iskaba dhaaf inaan quraan kale keenee, waxaanse raaci waxa lay waxyooday, illeen waxaan ka cabsan cadaab maalin daran haddaan caasiyo Rabbigey e, waxaana jirtay inaan muddo idinla noolaa oonan wax idiin sheegin, ee quraankan Alle ayaa soo dejiyey, hadduu doono waxba anigu idinkuma akhriyeen idinmana bareen ee miyeydaan wax kas ahayn. Cid ka dulmi badanna ma jirto cid ku been abuuratay Alle, ama beenisay aayaadkiisa, mana liibaano dambiile, waxayna ku tusin runnimada quraanka, inuusan Nabigu iskala imaan karin waxna ka baddali karin, waxna ku dari karin, waxaad arki kartaa warkii Hiriqle, Cabdullahi binu Salaam, Dimaam binu Thaclabo, Camar binu Caas iyo dad badan oo kale oo dhammaan sheegi runnimada quraanka iyo Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee). **[Yuunus: 15-17].**

وَيَعۡبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ مَا لَا يَضُرُّهُمۡ وَلَا يَنفَعُهُمۡ وَيَقُولُونَ هَٰٓؤُلَآءِ شُفَعَٰٓؤُنَا

18. Waxay caabudayaan Alle ka sokow waxaan dhibayn anfaceynna waxayna

عِندَ ٱللَّهِ ۚ قُلۡ أَتُنَبِّـُٔونَ ٱللَّهَ بِمَا لَا يَعۡلَمُ فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَلَا فِي ٱلۡأَرۡضِ ۚ سُبۡحَٰنَهُۥ وَتَعَٰلَىٰ عَمَّا يُشۡرِكُونَ ﴿١٨﴾

odhan kuwanu waa shafeecayaalkannaga Alle agtiisa, waxaad dhahdaa: ma waxaad uga warramaysaan Alle wuxuusan ku ogayn samooyinka iyo dhulka, wuxuu ka nasahan yahay oo ka sarreeyaa waxay la wadaajiyeen Alle.

وَمَا كَانَ ٱلنَّاسُ إِلَّآ أُمَّةً وَٰحِدَةً فَٱخۡتَلَفُواْ ۚ وَلَوۡلَا كَلِمَةٌ سَبَقَتۡ مِن رَّبِّكَ لَقُضِيَ بَيۡنَهُمۡ فِيمَا فِيهِ يَخۡتَلِفُونَ ﴿١٩﴾

19. Dadku wuxuu ahaa ummad kaliya markaasay iskhilaafeen, haddayan jirin kalimad Allehaa u horraysay waa la kala xukmin lahaa dhexdooda waxay isku diiddan yihiin.

وَيَقُولُونَ لَوۡلَآ أُنزِلَ عَلَيۡهِ ءَايَةٞ مِّن رَّبِّهِۦۖ فَقُلۡ إِنَّمَا ٱلۡغَيۡبُ لِلَّهِ فَٱنتَظِرُوٓاْ إِنِّي مَعَكُم مِّنَ ٱلۡمُنتَظِرِينَ ﴿٢٠﴾

20. Waxay odhan gaaladu maa lagaga soo dejiyo xagga allihii aayad, waxaad dhahdaa waxa maqan Alle umbaa iska leh, ee suga anuguna waan idinla sugiye.

Alle wuxuu ku diidi gaaladii la caabudday Alle wax kale iyagoo u malayn inay wax tari ama u shafeeci, markaasuu Alle u sheegay in waxaan Alle ahayn wax anfacayn, wax Alle looga warramina uusan jirin, Alle na wax walba oo xumaana waa ka nasahan yahay, dadkuna waxay ku sugnaayeen jid kaliya oo xaqa ah, markaasay iskhilaafeen oo qaarba wax Alle ka soo hadhay caabudeen, Allase waa dulbadane oo dadka ciqaabta uma soo dedejiyo iyagoon loo caddaynin xaqa. Waxayna codsadeen in Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) lagu soo dejiyo aayado muuqda, sidii ushii Nabi Muuse iyo hashii Nabi Saalax iyo wax la mida, awooddase Alle ayaa iska leh, isagaana soo dejiya wuxuu doono ee suga Nabiguna waa idinla sugiye, si aad u aragtaan xukunka Alle iyo awooddiisa. Dhabtuna waa in gaalo dhunsan tahay, halaag iyo ciqaabna u dambayso, xaquna cad yahay, ciddii rabtana u muuqdo, mudan yahay in la raaco, lana rumeeyo, oo lagu dhaqmo. **[Yuunus: 18-20].**

21. Markaan dhadhansiinno dadka naxariis dhibaato ka dib taabatay waxaa soo baxa iyagoo dhagri aayaadkannaga, waxaa deg-deg badan dhagarta Alle, malaa'igtannaduna way qori waxaad dhagraysaan.

وَإِذَآ أَذَقْنَا ٱلنَّاسَ رَحْمَةً مِّنۢ بَعْدِ ضَرَّآءَ مَسَّتْهُمْ إِذَا لَهُم مَّكْرٌ فِىٓ ءَايَاتِنَا ۚ قُلِ ٱللَّهُ أَسْرَعُ مَكْرًا ۚ إِنَّ رُسُلَنَا يَكْتُبُونَ مَا تَمْكُرُونَ ﴿٢١﴾

22. Alle waa kan idinku wada barriga iyo baddaba, markay ahaadaan doonta dhexdeeda oo ay ku socdaan dabayl fiican oo ay markaas ku farxaan oy u timaaddo dabayl daran ugana yimaaddo hirku dhan kasta oy una maleeyaan in la koobay (la halaagay) waxay baryaan Alle iyagoo u kali yeeli diinta iyagoo (dhihi): haddaad naga koriso tan waannu kugu mahdin.

هُوَ ٱلَّذِى يُسَيِّرُكُمْ فِى ٱلْبَرِّ وَٱلْبَحْرِ ۖ حَتَّىٰٓ إِذَا كُنتُمْ فِى ٱلْفُلْكِ وَجَرَيْنَ بِهِم بِرِيحٍ طَيِّبَةٍ وَفَرِحُوا۟ بِهَا جَآءَتْهَا رِيحٌ عَاصِفٌ وَجَآءَهُمُ ٱلْمَوْجُ مِن كُلِّ مَكَانٍ وَظَنُّوٓا۟ أَنَّهُمْ أُحِيطَ بِهِمْ دَعَوُا۟ ٱللَّهَ مُخْلِصِينَ لَهُ ٱلدِّينَ لَئِنْ أَنجَيْتَنَا مِنْ هَٰذِهِۦ لَنَكُونَنَّ مِنَ ٱلشَّٰكِرِينَ ﴿٢٢﴾

23. Markuu koriyeyna markaas ku xad gudbaan dhulka xaq darro, dadoow waxaad uun ku xad gudbaysaan naftiinna, waa uun nolosha dhaw markaas xagganagga laydiin soo celin waxaanna idiinka warramaynaa waxaad camal falayseen.

فَلَمَّآ أَنجَىٰهُمْ إِذَا هُمْ يَبْغُونَ فِى ٱلْأَرْضِ بِغَيْرِ ٱلْحَقِّ ۗ يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِنَّمَا بَغْيُكُمْ عَلَىٰٓ أَنفُسِكُم ۖ مَّتَٰعَ ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا ۖ ثُمَّ إِلَيْنَا مَرْجِعُكُمْ فَنُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٢٣﴾

Aayadahan wuxuu Alle kaga warrami dabeecadda dadka oo ah in marka dhibaato taabatana uu Alle baryo isuna dulleeyo, marka khayr iyo wanaag uu helana uu isla waynaado oo kibro, dhagar iyo khayaamana la darbado, Alle ayaase abaal mariya oo ka jaasiya, bad iyo barribana Alle ayaa iska leh mudanna cibaado, waxaase dhab ah in xumaantu ku noqon ciddii fashay Alle na abaal marin markuu u noqdo.

Saas darteed waa in had iyo jeer Alle si dhab ah loo caabudo, dhibaato iyo barwaaqo, cudur iyo caafimaad iyo gaajo iyo dharagba iwm... **[Yuunus: 21-23].**

إِنَّمَا مَثَلُ ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا كَمَآءٍ أَنزَلْنَٰهُ
مِنَ ٱلسَّمَآءِ فَٱخْتَلَطَ بِهِۦ نَبَاتُ ٱلْأَرْضِ
مِمَّا يَأْكُلُ ٱلنَّاسُ وَٱلْأَنْعَٰمُ حَتَّىٰٓ
إِذَآ أَخَذَتِ ٱلْأَرْضُ زُخْرُفَهَا وَٱزَّيَّنَتْ
وَظَنَّ أَهْلُهَآ أَنَّهُمْ قَٰدِرُونَ عَلَيْهَآ أَتَىٰهَآ
أَمْرُنَا لَيْلًا أَوْ نَهَارًا فَجَعَلْنَٰهَا حَصِيدًا
كَأَن لَّمْ تَغْنَ بِٱلْأَمْسِ ۚ كَذَٰلِكَ نُفَصِّلُ
ٱلْءَايَٰتِ لِقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ ﴿٢٤﴾

24. Nolosha adduunyo waa uun biyo oo kale oon ka soo dejinay samada oo ku dheehmay waxa ka soo baxa dhulka oo ah wuxuu dadku cuno iyo xooluhu, markuu dhulku qurux ka buuxsamo oy isqurxiso oo dadkeedu u maleeyo inay karaan (goosashadeeda) yaa waxaa u yimaadda amarkannagii habeen ama dharaar waxaanna ka yeellaa wax la shafay sidii iyadoon shalay jirin, saasaana ugu caddaynay aayaadka qoomkii fikiri.

وَٱللَّهُ يَدْعُوٓا۟ إِلَىٰ دَارِ ٱلسَّلَٰمِ وَيَهْدِى
مَن يَشَآءُ إِلَىٰ صِرَٰطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿٢٥﴾

25. Alle wuxuu ugu yeedhi (dadka) guriga nabadgalyada (jannada) wuxuuna ku hanuuniyaa cidduu doono jid toosan (xaqa).

لِّلَّذِينَ أَحْسَنُوا۟ ٱلْحُسْنَىٰ وَزِيَادَةٌ ۖ وَلَا
يَرْهَقُ وُجُوهَهُمْ قَتَرٌ وَلَا ذِلَّةٌ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ
أَصْحَٰبُ ٱلْجَنَّةِ ۖ هُمْ فِيهَا خَٰلِدُونَ ﴿٢٦﴾

26. Kuwa wanaagga falayna waxaa u sugnaaday wanaag (janno) (aakhiro), iyo siyaado (Alla oo la arko) mana haleelo wajigooda boodh iyo dulli midna, kuwaasuna waa asaxaabta (ehelka) jannada, wayna ku waari dhexdeeda.

Aayadda hore wuxuu Alle ku matalay nolosha adduunyo roob soo da'ay oo dhulka cunno ka soo saaray mid dad cuno iyo mid xoolo cunaanba, markii dhulkii quruxsanaaday oo ubixii baxay oo dooggii isqabsaday oo dadku u maleeyeen inuu goosan beerahoodii uu amarkii Alle u yimid oo eber ka yeelay sidii iyadoon shalay wax ku oollin.

Nolosha addunyana waa uun saas oo waxay isukaa qurxisaba markay ku dhaafto ama aad dhaaftid wanaaggeed iyo quruxdeed wax ma taraan, waxaase wax tara camal fiican iyo jidka nabadgalyo, waana midka Alle u yeedhi kuna toosiyo cidduu doono, ciddii wanaagga fashana waxay heli wanaag, janno,

aragga wajiga Allaha deeqda leh iyo khayr, dulmi iyo xumaanna ma arkaan, jannadana way ku waari.

Waxaa sugnaaday in marka jannada la galo loo dhawaaqi ehelu jannada in Alle u oofiyo ballankoodii waxayna arkaan Ilaahood, waana waxa ilu ugu farax badan tahay uguna jeceshahay. **[Yuunus: 24-26].**

وَٱلَّذِينَ كَسَبُواْ ٱلسَّيِّـَٔاتِ جَزَآءُ سَيِّئَةٍۭ بِمِثْلِهَا وَتَرْهَقُهُمْ ذِلَّةٌ ۖ مَّا لَهُم مِّنَ ٱللَّهِ مِنْ عَاصِمٍ ۖ كَأَنَّمَآ أُغْشِيَتْ وُجُوهُهُمْ قِطَعًا مِّنَ ٱلَّيْلِ مُظْلِمًا ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ أَصْحَٰبُ ٱلنَّارِ ۖ هُمْ فِيهَا خَٰلِدُونَ ﴿٢٧﴾

27. Kuwa kasbaday xumaan abaalkood waa xumaan la mida, waxaana haleeli dulli, wax Alle ka ilaalinna ma jiro, waxaadna mooddaa in lagu daboolay wajigooda goosin habeen oo mugdi ah, kuwaasu waa asaxaabta (ehelka) naarta, wayna ku waari dhexdeeda.

وَيَوْمَ نَحْشُرُهُمْ جَمِيعًا ثُمَّ نَقُولُ لِلَّذِينَ أَشْرَكُوا۟ مَكَانَكُمْ أَنتُمْ وَشُرَكَآؤُكُمْ ۚ فَزَيَّلْنَا بَيْنَهُمْ ۖ وَقَالَ شُرَكَآؤُهُم مَّا كُنتُمْ إِيَّانَا تَعْبُدُونَ ﴿٢٨﴾

28. Ka warran maalintaan kulminaynno dhammaan markaas aan ku dhahaynno kuwii la wadaajiyey cibaadada Alle duulal kale (gaaloobay) meeshiinna ahaada idinka iyo kuwaad la wadaajiseen, markaasaan kala gaynay dhexdooda, waxayna dheheen kuway la wadaajiyeen (Alle) annaga nama aydaan caabudayn.

فَكَفَىٰ بِٱللَّهِ شَهِيدًۢا بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمْ إِن كُنَّا عَنْ عِبَادَتِكُمْ لَغَٰفِلِينَ ﴿٢٩﴾

29. Waxaa markhaati dhexdeenna ugu filan Alle, waxaanna ahayn kuwa cibaadadiinna moog.

هُنَالِكَ تَبْلُوا۟ كُلُّ نَفْسٍ مَّآ أَسْلَفَتْ ۚ وَرُدُّوٓا۟ إِلَى ٱللَّهِ مَوْلَىٰهُمُ ٱلْحَقِّ ۖ وَضَلَّ عَنْهُم مَّا كَانُوا۟ يَفْتَرُونَ ﴿٣٠﴾

30. Halkaasay imtixaani (xaqiiqsan oo hubsan) naf kasta waxay hor marsatay, waxaana loo celiyaa Allaha sayidkooda xaqa ah, waxaana ka dhumay waxay been abuuranayeen.

Waxaa la soo kulmin maalinta qiyaame dadkoo dhan, markaasaa Alle faraa inay halkooda joogaan iyaga iyo waxay cabudayeen, waana lakala kaxeeyaa, kuwii la caabudayeyna way dafiraan inay caabudi jireen, oy waliba Alle marag gashan inayan ogayn cibaadadooda, halkaasaana lagu imtixaami naf kasta waxay hor marsatay, waxaana loo celin dadka Allahooda xaqa ah, waxaana gaalada ka dhumi waxay been abuuranayeen.

Waxayna muujin arrintaasu sida ciddii waxaan Alle ahayn caabudda ama raacda ay isu dafiri maalinta qiyaame, wax ay isu tarina ma jiro. Saas darteed waa in Alle sharcigiisa la raaco loona hoggaansamo. **[Yuunus: 27-30].**

قُلْ مَن يَرْزُقُكُم مِّنَ ٱلسَّمَآءِ وَٱلْأَرْضِ أَمَّن يَمْلِكُ ٱلسَّمْعَ وَٱلْأَبْصَٰرَ وَمَن يُخْرِجُ ٱلْحَىَّ مِنَ ٱلْمَيِّتِ وَيُخْرِجُ ٱلْمَيِّتَ مِنَ ٱلْحَىِّ وَمَن يُدَبِّرُ ٱلْأَمْرَ ۚ فَسَيَقُولُونَ ٱللَّهُ ۚ فَقُلْ أَفَلَا تَتَّقُونَ ﴿٣١﴾

31. Waxaad dhahdaa yaa idinka arsaqa samada iyo dhulka, yaana hanta maqalka, aragyada, yaana ka soo bixiya wax nool wax dhintay, kana soo bixiya wax dhintay wax nool, yaana maamula amarka waxay ku odhan Alle, waxaad dhahdaa miyeydaan dhawrsanayn.

فَذَٰلِكُمُ ٱللَّهُ رَبُّكُمُ ٱلْحَقُّ ۖ فَمَاذَا بَعْدَ ٱلْحَقِّ إِلَّا ٱلضَّلَٰلُ ۖ فَأَنَّىٰ تُصْرَفُونَ ﴿٣٢﴾

32. Kaasi waa Allaah Rabbigiinna xaqa ah, maxaase xaqa ka dambeeya (ka duwan) oon baadi ahayn, ee xaggee laydiin leexin.

كَذَٰلِكَ حَقَّتْ كَلِمَتُ رَبِّكَ عَلَى ٱلَّذِينَ فَسَقُوٓا۟ أَنَّهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٣٣﴾

33. Saasay ugu waajibtay kalimadii Allehaa kuwa faasiqoobay oo ah inayna rumeeynin (xaqa).

قُلْ هَلْ مِن شُرَكَآئِكُم مَّن يَبْدَؤُا۟ ٱلْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُۥ ۚ قُلِ ٱللَّهُ يَبْدَؤُا۟ ٱلْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُۥ ۖ فَأَنَّىٰ تُؤْفَكُونَ ﴿٣٤﴾

34. Waxaad dhahdaa ma ka mid yihiin shurkadiinna cid billowda abuurka soona celiya, waxaad dhahdaa Alle ayaa billaaba khalqiga soona celiya ee xaggee la idiin iili.

قُلْ هَلْ مِن شُرَكَآئِكُم مَّن يَهْدِىٓ إِلَى ٱلْحَقِّ ۚ قُلِ ٱللَّهُ يَهْدِى لِلْحَقِّ ۗ أَفَمَن يَهْدِىٓ إِلَى ٱلْحَقِّ أَحَقُّ أَن يُتَّبَعَ

35. Waxaad dhahdaa ma ka mid yahay shurakadiinna cid ku hanuunin xaqa, waxaad dhahdaa Alle ayaa ku hanuunin xaqa,

mase mid ku hanuunin xaqa yaa mudan in la raaco mise midaan hanuuninayn in la hanuuniyo mooyee, maxaad leedihiin sideed xukumaysaan.

أَمَّن لَّا يَهِدِّيٓ إِلَّآ أَن يُهْدَىٰ ۖ فَمَا لَكُمْ كَيْفَ تَحْكُمُونَ ﴿٣٥﴾

36. Mana raaco badankoodu waxaan malo ahayn, malana waxba kama taro xaqa, Alle na waa og yahay waxay falayaan.

وَمَا يَتَّبِعُ أَكْثَرُهُمْ إِلَّا ظَنًّا ۚ إِنَّ ٱلظَّنَّ لَا يُغْنِى مِنَ ٱلْحَقِّ شَيْـًٔا ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلِيمٌۢ بِمَا يَفْعَلُونَ ﴿٣٦﴾

Aayaddu waxay ka warrami sida Alle ugu samo falay dadka una arsuqay, maqal iyo aragna u siiyey, iyo awoodda Alle iyo inuu isagu wax maamulo, waana Allaha xaqa ah ee sugan, wax kale oo awood lehna ma jiro, illeen Alle ayaa khalqiga bilaabay soona celine, isagaana hanuuniya dadka, mudanna in la raaco, lana caabudo, gaaladuse waxaan malo ahayn kuma socdaan, malo iyo shakina waxba xaqa kama taraan, Alle na waa og yahay waxay fali xaq diidayaashu. Taasina waxay muujin in Alle uun yahay kan awoodda leh, mudanna in la caabudo, sharcigiisana la raaco, illeen isagaa wax hanuuniyee. **[Yuunus: 31-36].**

37. Ma aha quraankanu mid laga been abuurtay Alle ka sokow, waase u rumeeyaha wixii ka horreeyey iyo caddaynta kitaabka (xukunka), shakina kuma jiro, wuxuuna ka ahaaday Rabbiga caalamka.

وَمَا كَانَ هَٰذَا ٱلْقُرْءَانُ أَن يُفْتَرَىٰ مِن دُونِ ٱللَّهِ وَلَٰكِن تَصْدِيقَ ٱلَّذِى بَيْنَ يَدَيْهِ وَتَفْصِيلَ ٱلْكِتَٰبِ لَا رَيْبَ فِيهِ مِن رَّبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٣٧﴾

38. Mise waxay odhan wuu been abuurtay, waxaad dhahdaa la imaadda suurad la mida una yeedha ciddaad kartaan oo Alle ka soo hadhay haddaad run sheegaysaan.

أَمْ يَقُولُونَ ٱفْتَرَىٰهُ ۖ قُلْ فَأْتُوا۟ بِسُورَةٍ مِّثْلِهِۦ وَٱدْعُوا۟ مَنِ ٱسْتَطَعْتُم مِّن دُونِ ٱللَّهِ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٣٨﴾

39. Waxayse beeniyeen waxayna cilmigiisa koobin (quraanka) uusanna wali u imaannin aayahiisu, saasayna u beeniyeen kuwii ka horreeyey ee bal

بَلْ كَذَّبُوا۟ بِمَا لَمْ يُحِيطُوا۟ بِعِلْمِهِۦ وَلَمَّا يَأْتِهِمْ تَأْوِيلُهُۥ ۚ كَذَٰلِكَ كَذَّبَ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ ۖ فَٱنظُرْ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٣٩﴾

day siday noqotay cidhibtii daalimiinta.

40. Waxaa ka mida dadka mid rumeyn quraanka iyo midaan rumaynayn Alle na waa og yahay mufsidiinta.

وَمِنْهُم مَّن يُؤْمِنُ بِهِۦ وَمِنْهُم مَّن لَّا يُؤْمِنُ بِهِۦ ۚ وَرَبُّكَ أَعْلَمُ بِٱلْمُفْسِدِينَ ﴿٤٠﴾

Quraankuna waa xaq sugan oo Alle soo dejiyey, una rumeyn xaqii ka horreeyey, waana xaq caddeeye, shakina kuma jiro, Nabiguna iskalama imaannin, iyaba ha keeneen suurad la mida intay u kaalmaystaan cidday doonaan hadday run sheegi, waxayna beeniyeen waxayna cilmigiisa gaadhin isagoon wali fasirkiisii u imaannin, waxayse la mid yihiin kuwii ka horreeyey ee beeniyey xaqii ee daalimiinta ahaa lana halaagay, cidna way rumeyn quraanka, midina way beenin, Rabbigaa ayaase og mufsidiinta. **[Yuunus: 37-40].**

41. Hadday ku beeniyaan waxaad dhahdaa anugu waxaan leeyahay camalkayga idinkuna camalkiinna, idinku bari baad ka tihiin waxaan fali anna bari baan ka ahay waxaad falaysaan.

وَإِن كَذَّبُوكَ فَقُل لِّى عَمَلِى وَلَكُمْ عَمَلُكُمْ ۖ أَنتُم بَرِيٓـُٔونَ مِمَّآ أَعْمَلُ وَأَنَا۠ بَرِىٓءٌ مِّمَّا تَعْمَلُونَ ﴿٤١﴾

42. Waxaa ka mida gaalada kuwo ku dhagaysan ma adaa wax maqashiin kara mid dhaga la' oon wax kasayn.

وَمِنْهُم مَّن يَسْتَمِعُونَ إِلَيْكَ ۚ أَفَأَنتَ تُسْمِعُ ٱلصُّمَّ وَلَوْ كَانُوا۟ لَا يَعْقِلُونَ ﴿٤٢﴾

43. Waxaana ka mida mid ku soo dhawri, ma adaa toosin kara mid indha la' oon wax arkayn.

وَمِنْهُم مَّن يَنظُرُ إِلَيْكَ ۚ أَفَأَنتَ تَهْدِى ٱلْعُمْىَ وَلَوْ كَانُوا۟ لَا يُبْصِرُونَ ﴿٤٣﴾

44. Alle kama dulmiyo dadka waxba, hasa yeeshee dadkaa naftiisa dulmiya.

إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَظْلِمُ ٱلنَّاسَ شَيْـًٔا وَلَٰكِنَّ ٱلنَّاسَ أَنفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ ﴿٤٤﴾

45. Maalinta la kulminna waxay la mid noqon iyagoon nagaannin saacad maalin mooyee, wayna is aqoonsan dhexdooda, waxaana khasaaray kuwa

وَيَوْمَ يَحْشُرُهُمْ كَأَن لَّمْ يَلْبَثُوٓا۟ إِلَّا سَاعَةً مِّنَ ٱلنَّهَارِ يَتَعَارَفُونَ بَيْنَهُمْ ۚ قَدْ خَسِرَ ٱلَّذِينَ كَذَّبُوا۟ بِلِقَآءِ ٱللَّهِ وَمَا كَانُوا۟ مُهْتَدِينَ ﴿٤٥﴾

beeniyey la kulanka Alle mana hanuunsanayn.

Wuxuu Alle faray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu u sheego gaalo hadday beeniyaan inuu bari ka yahay camalkooda, iyana ay bari ka yihiin camalkiisa, cid dambi cid kale qaadina ayan jirin, cid xaqa ka indha la' iyo mid ka dhaga la'na cid wax tusi ama maqashiin ma jirto, Alle na cidna ma dulmiyo, dadkaase naftooda dulmiya, maalinta la soo kulminna waxay la mid noqon iyagoon nagaannin saacad maalmeed mooyee. Wayna is aqoonsan, waxaana khasaaray kuwa beeniyey la kulanka Alle mana hanuunsana. **[Yuunus: 41-45].**

وَإِمَّا نُرِيَنَّكَ بَعْضَ ٱلَّذِى نَعِدُهُمْ أَوْ نَتَوَفَّيَنَّكَ فَإِلَيْنَا مَرْجِعُهُمْ ثُمَّ ٱللَّهُ شَهِيدٌ عَلَىٰ مَا يَفْعَلُونَ ﴿٤٦﴾

46. Haddaan ku tusinno waxaannu ugu gooddin qaarkiis ama aan ku oofsanno, xaggannaga umbaa loo soo celin, markaasna Alle ayaa ka maraga waxay falayaan.

وَلِكُلِّ أُمَّةٍ رَّسُولٌ ۖ فَإِذَا جَآءَ رَسُولُهُمْ قُضِىَ بَيْنَهُم بِٱلْقِسْطِ وَهُمْ لَا يُظْلَمُونَ ﴿٤٧﴾

47. Ummad kasta rasuul bay leedahay, markuu u yimaaddo rasuulkooduna waxaa lagu kala xukmin caddaalad lamana dulmiyo.

وَيَقُولُونَ مَتَىٰ هَٰذَا ٱلْوَعْدُ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٤٨﴾

48. Waxayna odhan gaaladu waa goorma yaboohaas (gooddiga) haddaad run sheegaysaan.

قُل لَّآ أَمْلِكُ لِنَفْسِى ضَرًّا وَلَا نَفْعًا إِلَّا مَا شَآءَ ٱللَّهُ ۗ لِكُلِّ أُمَّةٍ أَجَلٌ ۚ إِذَا جَآءَ أَجَلُهُمْ فَلَا يَسْتَـْٔخِرُونَ سَاعَةً وَلَا يَسْتَقْدِمُونَ ﴿٤٩﴾

49. Waxaad dhahdaa uma hanto naftayda dhib iyo nacfi midna wuxuu Alle doono mooyee, ummad kastana waxay leedahay ajal (muddo) markay ajashoodu timaadana lagama dib mariyo saacad lagamana hor mariyo.

Hadduu Alle tusiyo Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) isagoo nool ciqaabta gaalada ku dhici waa wanaag, haddii kalana xagga Alle umbaa loo soo celin gaalada, Alle na waa u marag waxay fali. Ummad kasta oo rasuul loo soo diro markuu u yimaaddo rasuulkoodu waxaa lagu kala xukmin dhexdooda caddaalad lamana dulmiyo, waxayse odhan waa goorma

yaboohu haddaad run sheegaysaan, wuxuuna Alle faray Rasuulka (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu u sheego inuusan hanannin dhib iyo nacfi midna, wuxuu Alle doono mooyee, ummad kastana waxay leedahay muddo ayna ka hor maraynin kana dib dhacaynin.

Taasina waxay sheegi in awoodda iyo ogaanshahaba Alle iska leeyahay. **[Yuunus: 46-49].**

قُلْ أَرَءَيْتُمْ إِنْ أَتَىٰكُمْ عَذَابُهُۥ بَيَٰتًا أَوْ نَهَارًا مَّاذَا يَسْتَعْجِلُ مِنْهُ ٱلْمُجْرِمُونَ ﴿٥٠﴾

50. Waxaad dhahdaa bal ka warrama hadduu idiinku yimaaddo cadaabkiisu (Alle) mir ama maalin maxay ka dedejisan xaggiisa dambiilayaashu.

أَثُمَّ إِذَا مَا وَقَعَ ءَامَنتُم بِهِۦٓ ءَآلْـَٰٔنَ وَقَدْ كُنتُم بِهِۦ تَسْتَعْجِلُونَ ﴿٥١﴾

51. Mise markuu dhacaad rumaynaysaan. Ma hadda (ayaad rumayanaysaan) idinkoo dedejisanayey (oo beeninayay).

ثُمَّ قِيلَ لِلَّذِينَ ظَلَمُوا۟ ذُوقُوا۟ عَذَابَ ٱلْخُلْدِ هَلْ تُجْزَوْنَ إِلَّا بِمَا كُنتُمْ تَكْسِبُونَ ﴿٥٢﴾

52. Markaasaa lagu odhan kuwii dulmi falay dhadhamiya cadaabka waaridda, miyaana laydinka abaal marini waxaad kasbanayseen mooyee.

* وَيَسْتَنۢبِـُٔونَكَ أَحَقٌّ هُوَ ۖ قُلْ إِى وَرَبِّىٓ إِنَّهُۥ لَحَقٌّ ۖ وَمَآ أَنتُم بِمُعْجِزِينَ ﴿٥٣﴾

53. Waxay ku warsan ma xaq baa isagu, dheh: haa, Rabbigey baan ku dhaartaye isagaa xaqa, idinkuna ma tihidiin kuwo (Alle) daalin.

وَلَوْ أَنَّ لِكُلِّ نَفْسٍ ظَلَمَتْ مَا فِى ٱلْأَرْضِ لَٱفْتَدَتْ بِهِۦ ۗ وَأَسَرُّوا۟ ٱلنَّدَامَةَ لَمَّا رَأَوُا۟ ٱلْعَذَابَ ۚ وَقُضِىَ بَيْنَهُم بِٱلْقِسْطِ وَهُمْ لَا يُظْلَمُونَ ﴿٥٤﴾

54. Hadday naf kasta oo dulmi fashay leedahay waxa dhulka ku sugan way isku furan lahayd, waxayna qarsan gaaladu shalayto markay arkaan cadaabka, waxaana lugu kala xukmin dhexdooda xaq, lamana dulminayo.

Cadaabka Alle wax la dedejisto ma aha, illeen markuu dhaco calaacal iyo waan rumeeyey wax ma tartee, waxaase lagu odhan kuwii dulmi falay: dhadhamiya

cadaabka waaridda waxaad kasbaneyseen umbaa laydinka abaal marine. Waxayna gaaladu Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) warsanayeen ma xaqbaa quraanku, waxaana Alle faray inuu yidhaahdo haa waa xaq, Rabbigay baan ku dhaartaye, waxna ma daalisaan. Hadday nafu hanato iyadoo dulmi fashay waxa dhulka ku sugan way isku furan lahayd, waxayna qarsadaan qoomammo markay arkaan cadaabka, waxaana lagu kala xukmin caddaalad lamana dulmiyo. Taasina waxay muujinaysaa xaqnimada quraanka iyo Nabiga iyo darrida cadaabka Alle oy waajib tahay in la darbado si looga nabadgalo. **[Yuunus: 50-54].**

أَلَآ إِنَّ لِلَّهِ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۗ أَلَآ إِنَّ وَعْدَ ٱللَّهِ حَقٌّ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٥٥﴾

55. Alle na waxaa u sugnaaday waxa ku sugan samooyinka iyo dhulka, yabooha Alle na waa xaq, dadka badankiisuse ma oga.

هُوَ يُحْيِۦ وَيُمِيتُ وَإِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿٥٦﴾

56. Alle ayaa wax nooleeya waxna dila xaggiisaana laydiin soo celin.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ قَدْ جَآءَتْكُم مَّوْعِظَةٌ مِّن رَّبِّكُمْ وَشِفَآءٌ لِّمَا فِي ٱلصُّدُورِ وَهُدًى وَرَحْمَةٌ لِّلْمُؤْمِنِينَ ﴿٥٧﴾

57. Dadow waxaa idiin timid waano Allihiin iyo caafimaadka waxa laabta ku sugan iyo hanuun iyo naxariista mu'mininta.

قُلْ بِفَضْلِ ٱللَّهِ وَبِرَحْمَتِهِۦ فَبِذَٰلِكَ فَلْيَفْرَحُوا۟ هُوَ خَيْرٌ مِّمَّا يَجْمَعُونَ ﴿٥٨﴾

58. Waxaad dhahdaa fadliga Alle iyo naxriistiisa arrintaas ha ku farxeen (mu'miniintu) iyadaa uga khayr roon waxay kulmine.

قُلْ أَرَءَيْتُم مَّآ أَنزَلَ ٱللَّهُ لَكُم مِّن رِّزْقٍ فَجَعَلْتُم مِّنْهُ حَرَامًا وَحَلَٰلًا قُلْ ءَآللَّهُ أَذِنَ لَكُمْ ۖ أَمْ عَلَى ٱللَّهِ تَفْتَرُونَ ﴿٥٩﴾

59. Waxaad dhahdaa ka warrama waxa Alle idiin soo dejiyo oo risqi ah ood ka yeesheen qaar ka mida xaaraan (qaarna) xalaal, waxaad dhahdaa ma Alle ayaa idiin idmay mise Alle ayaad ku been abuuranaysaan.

وَمَا ظَنُّ ٱلَّذِينَ يَفْتَرُونَ عَلَى ٱللَّهِ ٱلْكَذِبَ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَذُو فَضْلٍ عَلَى ٱلنَّاسِ وَلَٰكِنَّ

60. Maxay u malayn kuwa ku been abuuran Alle (inuu ku fali) maalinta qiyaame, Alle waa ka fadliga ku leh

dadka, badankooduse kuma mahadiyaan.

أَكۡثَرَهُمۡ لَا يَشۡكُرُونَ ٦٠

Alle ayaana iska leh xukunka cirka iyo dhulka, yaboohiisuna waa xaq, mase oga badankoodu. Isagaana Alle wax nooleeya waxna dila, xaggiisaana loo noqon, waxaana dadka soo gaadhay waano xagga Alle ka timid oo quraanka ah iyo caafiyaha waxa laabta ku sugan iyo hanuunka iyo naxariista mu'miniinta, fadliga Alle iyo naxariistiisana ha ku farxeen, iyadaa ka fiican waxay kulmin oo aduunyo ahe. Gaaladuna xaq uma leh inay risqiga Alle qaarna xarrimaan qaarna xalaaleeyaan, Alle uma idmin sidaas ee way ku been abuuran Alle, maxayse u malayn kuwa ku been abuuran Alle waxay mudan maalinta qiyaame, Alle ayaana wax xalaaleeya, waxna xarrima, laguna mahadiyaa, awooddana leh. **[Yuunus: 55-60].**

وَمَا تَكُونُ فِي شَأۡنٖ وَمَا تَتۡلُواْ مِنۡهُ مِن قُرۡءَانٖ وَلَا تَعۡمَلُونَ مِنۡ عَمَلٍ إِلَّا كُنَّا عَلَيۡكُمۡ شُهُودًا إِذۡ تُفِيضُونَ فِيهِۚ وَمَا يَعۡزُبُ عَن رَّبِّكَ مِن مِّثۡقَالِ ذَرَّةٖ فِي ٱلۡأَرۡضِ وَلَا فِي ٱلسَّمَآءِ وَلَآ أَصۡغَرَ مِن ذَٰلِكَ وَلَآ أَكۡبَرَ إِلَّا فِي كِتَٰبٖ مُّبِينٍ ٦١

61. Wixii xaala ood ku sugan tahay, wixii quraana ood akhrin, wixii camala ood falaysaan waan idin la joognaana (ognahay) markaad dhex galaysaan, kagama qarsoona Allehaa waxa u yar dhulka dhexdiisa iyo samada, wixii ka yar iyo wixii ka waynba kitaab cad bay ku sugan yihiin.

أَلَآ إِنَّ أَوۡلِيَآءَ ٱللَّهِ لَا خَوۡفٌ عَلَيۡهِمۡ وَلَا هُمۡ يَحۡزَنُونَ ٦٢

62. Awliyada Alle na cabsi ma saarra mana murugoodaan.

ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَكَانُواْ يَتَّقُونَ ٦٣

63. Waana kuwa rumeeyay (xaqa) dhawrsadana.

لَهُمُ ٱلۡبُشۡرَىٰ فِي ٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَا وَفِي ٱلۡأٓخِرَةِۚ لَا تَبۡدِيلَ لِكَلِمَٰتِ ٱللَّهِۚ ذَٰلِكَ هُوَ ٱلۡفَوۡزُ ٱلۡعَظِيمُ ٦٤

64. Waxaana u sugnaaday bishaaro nolosha adduunyo iyo aakhiraba, wax badali kalimada Alle na ma jiro, taasina waa uun liibaanta wayn.

وَلَا يَحۡزُنكَ قَوۡلُهُمۡۘ إِنَّ ٱلۡعِزَّةَ لِلَّهِ جَمِيعًاۚ هُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلۡعَلِيمُ ٦٥

65. Yuuna ku walbahaarin hadalkoodu. Cisi dhamaantiis Alle ayaa iska leh, waana maqle oge.

Wax kasta oo la fali iyo haddii quraan la akhrin Alle waa og yahay marka la dhex geli, wax Alle kaga qarsoomi cirka iyo dhulkana ma jiro, ama ha u yaraado sida darrada ama ha ka sii yaraado ama ha ka waynaado illeen wax kasta kitaab cad bay ku sugan yihiin, awliyada Ilaahyna cabsi iyo walbahaar ma arkaan aakhiro, waase kuwee? Waa kuwa Alle rumeeyay ee ka dhawrsada xummaanta, waxayna heli bishaaro aduun iyo aakhiraba, wax hadalka Alle baddalina ma jiro, taasina waa liibaanta wayn. Waxaana kuu muuqda tilmaanta awliyada Alle oo ah kuwa xaqa si dhaba u rumeeyay, raacana quraanka iyo sunnada Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) si dhabana ugu toosnaada diinta iyo waxay fari, ciddiise aan tilmaantaas ku sifoobin ma aha wali Alle lagumana sheegi karo, waxaase lagu garan diinta dhab ma u raacay.

Bishaarada adduunka wuxuu Nabigu ku fasiray riyada fiican oo ruux arko ama loo arko, aakhirana waa jannada, waana kuwaas kuwaan cabsanaynin marka dadku cabsado oon murugoonayn marka dadku murugoodo, waana kuwa dar Alle isu jeclaado iyagoon qaraabo isku xidhayn xoolana isasiin, waase in xaqa lagu dadaalo. **[Yuunus: 61-65].**

أَلَآ إِنَّ لِلَّهِ مَن فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَن فِى ٱلْأَرْضِ ۗ وَمَا يَتَّبِعُ ٱلَّذِينَ يَدْعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ شُرَكَآءَ ۚ إِن يَتَّبِعُونَ إِلَّا ٱلظَّنَّ وَإِنْ هُمْ إِلَّا يَخْرُصُونَ ﴿٦٦﴾

66. Alle ayaa iska leh waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan, maxay raacayaan kuwa Alla sokadii shurako caabudaya? Waxaan mala ahayna ma raacayaan, waxaan beenaalayaal ahaynna ma aha.

هُوَ ٱلَّذِى جَعَلَ لَكُمُ ٱلَّيْلَ لِتَسْكُنُوا۟ فِيهِ وَٱلنَّهَارَ مُبْصِرًا ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَٰتٍ لِّقَوْمٍ يَسْمَعُونَ ﴿٦٧﴾

67. Alle waa kan idiin yeelay habeenka inaad xasishaan, malintana tu dhexdeeda wax lugu arko (ka yeelay), arrintaasna waxaa ugu sugan calaamooyin qoomkii wax maqli.

قَالُوا۟ ٱتَّخَذَ ٱللَّهُ وَلَدًا سُبْحَٰنَهُۥ ۖ هُوَ ٱلْغَنِىُّ ۖ لَهُۥ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِى ٱلْأَرْضِ ۚ إِنْ عِندَكُم مِّن سُلْطَٰنٍۭ بِهَٰذَآ ۚ أَتَقُولُونَ عَلَى ٱللَّهِ مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿٦٨﴾

68. Waxay dheheen wuxuu yeeshay Alle ilmo, waa nasahan yahay, Alle na waa uun hodan, wuxuuna leeyahay waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan, agtiinna xujo uma taal waxaas (beenta), mise Alle ayaad ku sheegaysaan waxaydaan ogayn.

قُلْ إِنَّ ٱلَّذِينَ يَفْتَرُونَ عَلَى ٱللَّهِ ٱلْكَذِبَ لَا يُفْلِحُونَ ﴿٦٩﴾

69. Waxaad dhahdaa kuwa Alle ku abuurta beenta ma liibaanaan.

مَتَٰعٌ فِى ٱلدُّنْيَا ثُمَّ إِلَيْنَا مَرْجِعُهُمْ ثُمَّ نُذِيقُهُمُ ٱلْعَذَابَ ٱلشَّدِيدَ بِمَا كَانُوا۟ يَكْفُرُونَ ﴿٧٠﴾

70. Waa uun raaxada adduunyo markaas xaggannagaa noqoshadoodu noqon, markaasaan dhadhansiinaynaa cadaab daran gaalnimadooda darteed.

Alle ayaa leh cirka iyo dhulka iyo khalqigoo dhan, gaalana wax dhaba ma caabudayaan ee waxay ku socdaan malo iyo been, iyagoo diiddan Allaha habeenka xasil ka yeelay, maalintiina iftiin iyo waqti wax arag, waana arrin mudan in lagu waano qaato ciddii wax maqli. Been bayna illeen sheegeen iyagoo ku sheegi Alle ilmo isagoo ka nasahan, khalqigoo dhan yuu leeyahaye, wax xujo ahna ma hayaan, waxayna Alle ku sheegi waxayna ogayn, ciddii Alle ku been abuuratana ma liibaanto, waa muddo yar nolosha adduun, waxaana loo ceiin Alle wuxuuna dhadhansiin cadaab daran gaalnimadooda darteed, taasina waa ciqaabta gaalada xaqa diida. **[Yuunus: 66-70].**

* وَٱتْلُ عَلَيْهِمْ نَبَأَ نُوحٍ إِذْ قَالَ لِقَوْمِهِۦ يَٰقَوْمِ إِن كَانَ كَبُرَ عَلَيْكُم مَّقَامِى وَتَذْكِيرِى بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ فَعَلَى ٱللَّهِ تَوَكَّلْتُ فَأَجْمِعُوٓا۟ أَمْرَكُمْ وَشُرَكَآءَكُمْ ثُمَّ لَا يَكُنْ أَمْرُكُمْ عَلَيْكُمْ غُمَّةً ثُمَّ ٱقْضُوٓا۟ إِلَىَّ وَلَا تُنظِرُونِ ﴿٧١﴾

71. Ku akhri korkooda warkii Nabi Nuux markuu ku yidhi qoomkiisii: qoomkayow hadday idin la waynaatay nagaadigayga iyo ku waanintayda aayaadka Alle waxaan tala saartay Alle ee kulmiya amarkiinna iyo shurakadiinna yuuna ahaan amarkiinna wax qarsoon (oo dhiba) markaas i xukuma hana i sugina.

فَإِن تَوَلَّيْتُمْ فَمَا سَأَلْتُكُم مِّنْ أَجْرٍ ۖ إِنْ أَجْرِىَ إِلَّا عَلَى ٱللَّهِ ۖ وَأُمِرْتُ أَنْ أَكُونَ مِنَ ٱلْمُسْلِمِينَ ﴿٧٢﴾

72. Haddaad jeedsataan idin warsan maayo ujuuro, ujuuradayda waxaa isiin Alle, waxaana lay faray inaan ka mid ahaado muslimiinta.

فَكَذَّبُوهُ فَنَجَّيْنَٰهُ وَمَن مَّعَهُۥ فِى ٱلْفُلْكِ وَجَعَلْنَٰهُمْ خَلَٰٓئِفَ وَأَغْرَقْنَا

73. Wayna beeniyeen waxaana ku korinnay Nabi Nuux iyo intii la jirtay doontii, waxaana ka

ٱلَّذِينَ كَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِنَاۖ فَٱنظُرۡ كَيۡفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلۡمُنذَرِينَ ٧٣

yeelnay kuwo u hadha dhulka, waxaana maanshaynay kuwii beeniyey aayaadkannaga ee day siday noqotay cidhibtii kuwii loo digay.

Qisada Nabi Nuux iyo Nabiyo kale oo badanba wax badan bay ku soo aroortay quraanka, meelo badanna lagu sheegay waxaana habboon in lagu waano qaato illeen wuxuu Alle u soo celceliyey in lagu waano qaato, lagana leexdo jidkoodii iyo camalkii xumaa, waxayna noqotay cidhibtii qoomkii Nabi Nuux khasaare, halaag iyo jab, markay khilaafeen amarkii Alle beeniyeenna Nabi Nuux, waana sidaas abaalka xaqdiidayaasha ka madax adayga wanaagga, xumaantana ku madax taaga, ciddii Alle ku kalsoonaata, rumaysa, xaqa ku socota, wanaaggana fasha cid wax yeeli karta oon Alle ahayn ma jirto, illeen ciddii Alle talasaarata wuu ku filan yahaye. **[Yuunus: 71-73].**

ثُمَّ بَعَثۡنَا مِنۢ بَعۡدِهِۦ رُسُلًا إِلَىٰ قَوۡمِهِمۡ فَجَآءُوهُم بِٱلۡبَيِّنَٰتِ فَمَا كَانُواْ لِيُؤۡمِنُواْ بِمَا كَذَّبُواْ بِهِۦ مِن قَبۡلُۚ كَذَٰلِكَ نَطۡبَعُ عَلَىٰ قُلُوبِ ٱلۡمُعۡتَدِينَ ٧٤

74. Markaas kadib waxaan u bixinnay rasuullo qoomkoodii waxayna ula yimaadeen xujooyin, mana rumayn beenintoodii darteed ee horraysay, saasaan u daabacnaa «daboollaa» quluubta xadgudbayaasha.

ثُمَّ بَعَثۡنَا مِنۢ بَعۡدِهِم مُّوسَىٰ وَهَٰرُونَ إِلَىٰ فِرۡعَوۡنَ وَمَلَإِيْهِۦ بِـَٔايَٰتِنَا فَٱسۡتَكۡبَرُواْ وَكَانُواْ قَوۡمٗا مُّجۡرِمِينَ ٧٥

75. Markaasaan u bixinay gadaashood (Nabi) Muuse iyo (Nabi) Haaruun Fircoon iyo colkiisii iyagoo wata aayaadkannagii, wayna isla waynaadeen waxayna noqdeen qoom dambiilayaal ah.

فَلَمَّا جَآءَهُمُ ٱلۡحَقُّ مِنۡ عِندِنَا قَالُوٓاْ إِنَّ هَٰذَا لَسِحۡرٞ مُّبِينٞ ٧٦

76. Markuu uga yimid xaqu xaggannaga waxay dhaheen kani waa sixir cad.

قَالَ مُوسَىٰٓ أَتَقُولُونَ لِلۡحَقِّ لَمَّا جَآءَكُمۡۖ أَسِحۡرٌ هَٰذَا وَلَا يُفۡلِحُ ٱلسَّٰحِرُونَ ٧٧

77. Wuxuuna yidhi (Nabi) Muuse ma waxaad ku dhahaysaan xaqa markuu idiin yimid (waa sixir). Ma sixirbaa kani? Isagoosan liibaanin saaxiriintu.

78. Waxayna dhaheen ma waxaad noogu timid inaad naga leexisid waxaan ka hellay aabayaalkanno oy idiin ahaato waynaanta dhulka (xukunka) annagu idinka idin rumayn maynno.

قَالُوٓاْ أَجِئۡتَنَا لِتَلۡفِتَنَا عَمَّا وَجَدۡنَا عَلَيۡهِ ءَابَآءَنَا وَتَكُونَ لَكُمَا ٱلۡكِبۡرِيَآءُ فِي ٱلۡأَرۡضِ وَمَا نَحۡنُ لَكُمَا بِمُؤۡمِنِينَ ٧٨

Aayadahanna waxay ka warrami rasuulladuu diray Alle iyo qisadii Nabi Muuse iyo Haaruun iyo wixii dhex maray Fircoon iyo qoomkiisii iyo Nabiyadaas, markay is kibriyeen ahaadeenna danbiilayaal, kuna sheegeen xaqii sixir, Nabi Muusana uu sheegay in saaxiriintu ayan liibaanaynin, markaasay tuhmaysteen iyagoo sheegi inuu dooni Nabi Muuse inuu ka leexiyo waxay aabayaalkood ka heleen oo markaas u ahaato sharafta iyo awooddu Nabi Muuse iyo qoomkiisa, waxayna caddeeyeen inayan marna rumaynayn, taasina waa caadada iyo dabeecadda gaalada iyo xaqdiidayaasha oo ku sheega xaqsheegayaasha xumaan iyo awood ujeed iyo ceebo ayna lahayn, xaqaase guushu ku danbayn. **[Yuunus: 74-78].**

79. Wuxuu yidhi Fircoon: ii keena saaxir cilmi badan oo dhan.

وَقَالَ فِرۡعَوۡنُ ٱئۡتُونِي بِكُلِّ سَٰحِرٍ عَلِيمٖ ٧٩

80. Markay yimaadeen saaxiriintiina wuxuu ku yidhi (Nabi) Muuse: tuura waxaad tuuraysaan.

فَلَمَّا جَآءَ ٱلسَّحَرَةُ قَالَ لَهُم مُّوسَىٰٓ أَلۡقُواْ مَآ أَنتُم مُّلۡقُونَ ٨٠

81. Markay tuureenna wuxuu yidhi (Nabi) Muuse: sixir baad la timaaddeen Alle ayaana burin, Alle na ma hagaajiyo camalka fasaadiyayaasha.

فَلَمَّآ أَلۡقَوۡاْ قَالَ مُوسَىٰ مَا جِئۡتُم بِهِ ٱلسِّحۡرُۖ إِنَّ ٱللَّهَ سَيُبۡطِلُهُۥٓۖ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُصۡلِحُ عَمَلَ ٱلۡمُفۡسِدِينَ ٨١

82. Wuxuuna ku sugaa Alle xaqa kalimadiisa haba naceen dambiilayaashuye.

وَيُحِقُّ ٱللَّهُ ٱلۡحَقَّ بِكَلِمَٰتِهِۦ وَلَوۡ كَرِهَ ٱلۡمُجۡرِمُونَ ٨٢

83. Ma rumaynin Nabi Muuse farac yar oo qoomkiisii ka mida mooyee iyagoo ka cabsan Fircoon iyo kooxdiisii inay

فَمَآ ءَامَنَ لِمُوسَىٰٓ إِلَّا ذُرِّيَّةٞ مِّن قَوۡمِهِۦ عَلَىٰ خَوۡفٖ مِّن فِرۡعَوۡنَ وَمَلَإِيْهِمۡ أَن يَفۡتِنَهُمۡۚ وَإِنَّ فِرۡعَوۡنَ لَعَالٖ

فِي ٱلْأَرْضِ وَإِنَّهُۥ لَمِنَ ٱلْمُسْرِفِينَ ﴿٨٣﴾

fidmeeyaan, Fircoonna wuu isku kibriyey dhulka wuxuuna ka mid ahaa xadgudbayaasha.

Saasuuna Fircoon isula waynaaday una codsaday in loo soo kulmiyo ciddii sixirka taqaan, markaasay yimaaddeen waxaana dhexmaray isaga iyo Nabi Muuse arrimihii wax badan quraanku ka warramay oo ah in guushii Nabi Muuse raacday saaxiriintiina islaameen oo xaqa raaceen, Alle na tirtiray sixirkii illeen dhagarlow ma liibaanee, xaqiina wuu sugay haba naceen dambiilayaashuye, Nabi Muusana markaas waxaa rumeeyey dad yar oo Fircoon ka cabsan illeen Fircoon wuxuu ahaa nin isla wayn oo xad gudba, maxaase u dambeeyey isaga iyo colkiisii kibray waxaa ka warrami aayadaha soo socda. **[Yuunus: 79-83].**

وَقَالَ مُوسَىٰ يَٰقَوْمِ إِن كُنتُمْ ءَامَنتُم بِٱللَّهِ فَعَلَيْهِ تَوَكَّلُوٓاْ إِن كُنتُم مُّسْلِمِينَ ﴿٨٤﴾

84. Wuxuu yidhi (Nabi) Muuse: qoomkayow haddaad tihiin kuwa rumeeyey Alle isaga uun tala saarta haddaad muslimiin tihiin.

فَقَالُواْ عَلَى ٱللَّهِ تَوَكَّلْنَا رَبَّنَا لَا تَجْعَلْنَا فِتْنَةً لِّلْقَوْمِ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٨٥﴾

85. Waxayna dheheen: Alle yaan talo saarannay, Rabbigeenow hanooga yeelinna fidmo qoomka daalimiinta ah.

وَنَجِّنَا بِرَحْمَتِكَ مِنَ ٱلْقَوْمِ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٨٦﴾

86. Nagana kori naxariistaada darteed qoomka gaalada ah.

وَأَوْحَيْنَآ إِلَىٰ مُوسَىٰ وَأَخِيهِ أَن تَبَوَّءَا لِقَوْمِكُمَا بِمِصْرَ بُيُوتًا وَٱجْعَلُواْ بُيُوتَكُمْ قِبْلَةً وَأَقِيمُواْ ٱلصَّلَوٰةَۗ وَبَشِّرِ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٨٧﴾

87. Waxaana u waxyoonnay (Nabi) Muuse iyo walaalkiis inaad uga yeeshaan qoomkiinna Masar guryo kana yeesha guryihiinna qiblada (ku tukada) ooga salaadda una bishaaree mu'miniinta.

وَقَالَ مُوسَىٰ رَبَّنَآ إِنَّكَ ءَاتَيْتَ فِرْعَوْنَ وَمَلَأَهُۥ زِينَةً وَأَمْوَٰلًا فِي ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا رَبَّنَا لِيُضِلُّواْ عَن سَبِيلِكَۖ رَبَّنَا ٱطْمِسْ

88. Wuxuuna yidhi (Nabi) Muuse: Rabbigeenow adaa siiyey Fircoon iyo kooxdiisa qurux iyo xoolo nolosha adduunka Allow inay ka dhumiyaan jidkaaga, Allow

halaag (tirtir) xoolahooda adkeena quluubtooda oo yeyna rumeynin intay ka arkaan cadaab daran.

عَلَىٰٓ أَمۡوَٰلِهِمۡ وَٱشۡدُدۡ عَلَىٰ قُلُوبِهِمۡ فَلَا يُؤۡمِنُواْ حَتَّىٰ يَرَوُاْ ٱلۡعَذَابَ ٱلۡأَلِيمَ ٨٨

89. Alle wuxuu yidhi waa la ajiibay baryadiinna ee toosnaada hana raacina jidka kuwaan wax ogayn.

قَالَ قَدۡ أُجِيبَت دَّعۡوَتُكُمَا فَٱسۡتَقِيمَا وَلَا تَتَّبِعَآنِّ سَبِيلَ ٱلَّذِينَ لَا يَعۡلَمُونَ ٨٩

Nabi Muuse qoomkiisii yuu u dardaarmay inay Alle talo saartaan waxayna Alle warsadeen wanaag iyo naxariis, Alle na wuxuu faray Nabi Muuse iyo Haaruun inay dadka Masar dajiyaan, guryahana ku tukadaan, salaaddana oogaan, una bishaareeyaan mu'miniinta, Nabi Muusana wuxuu habaaray Fircoon iyo qoomkiisii Alle na waa ka aqbalay baryadii, wuxuuna faray toosnaan iyo inayna raacin jidka jaahiliinta, taasina waxay ku tusin in wanaagga iyo jidka toosan lagu socdo oon la leexanin. **[Yuunus: 84-89].**

90. Waxaan tallaabinay banii israa'iil badda waxayna u raaceen Fircoon iyo qoomkiisii kibir iyo cadaawanimo, markay haleeshay maansheyntiina wuxuu yidhi (Fircoon): waxaan rumeeyey inaan Allaha ay rumeeyeen banii israa'iil mooyee ku cibaada mutay oo kale jirin, waxaana ka mid ahay muslimiinta.

* وَجَٰوَزۡنَا بِبَنِيٓ إِسۡرَٰٓءِيلَ ٱلۡبَحۡرَ فَأَتۡبَعَهُمۡ فِرۡعَوۡنُ وَجُنُودُهُۥ بَغۡيًا وَعَدۡوًا حَتَّىٰٓ إِذَآ أَدۡرَكَهُ ٱلۡغَرَقُ قَالَ ءَامَنتُ أَنَّهُۥ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا ٱلَّذِيٓ ءَامَنَتۡ بِهِۦ بَنُوٓاْ إِسۡرَٰٓءِيلَ وَأَنَا۠ مِنَ ٱلۡمُسۡلِمِينَ ٩٠

91. (Alle wuxuu yidhi): hadda (miyaad rumeyn) adoo horay u caasiyey oodna ka mid ahayd kuwa wax fasaadiya.

ءَآلۡـَٰٔنَ وَقَدۡ عَصَيۡتَ قَبۡلُ وَكُنتَ مِنَ ٱلۡمُفۡسِدِينَ ٩١

92. Maanta waxaannu korin badankaaga inaad u noqotid cidda kaa dambaysa calaamo, wax badan oo dadka ka mida aayaadkannaga waa halmaansan yihiin.

فَٱلۡيَوۡمَ نُنَجِّيكَ بِبَدَنِكَ لِتَكُونَ لِمَنۡ خَلۡفَكَ ءَايَةٗۚ وَإِنَّ كَثِيرٗا مِّنَ ٱلنَّاسِ عَنۡ ءَايَٰتِنَا لَغَٰفِلُونَ ٩٢

93. Waxaan dejinnay banii israa'iil dejin runa (meel fiican) waxaana ku arsaaqnay wanaag, waxayna is khilaafeen markuu cilmigu u yimid, Rabbigaana wuu kala xukumi maalinta qiyaame waxay isku khilaafeen.

وَلَقَدْ بَوَّأْنَا بَنِيٓ إِسْرَٰٓءِيلَ مُبَوَّأَ صِدْقٍ وَرَزَقْنَٰهُم مِّنَ ٱلطَّيِّبَٰتِ فَمَا ٱخْتَلَفُوا۟ حَتَّىٰ جَآءَهُمُ ٱلْعِلْمُ ۚ إِنَّ رَبَّكَ يَقْضِى بَيْنَهُمْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ فِيمَا كَانُوا۟ فِيهِ يَخْتَلِفُونَ ﴿٩٣﴾

Halkan wuxuu Alle ku caddayn siduu u maansheeyey Fircoon iyo colkiisii, waxaana dhacay in markii banii isaraa'iil gudbeen, Fircoon iyo dadkiisiina biyaha badda ku dhex jiraan Alle maansheeyey siday aayado kale caddeeyeen, markaasna uu dambiile Fircoon isku dayey inuu Alle qiro, maxaase laga aqbali markaas oo kale, mar hadduu ahaa dulmi badane, col ah, caasi ah, oo mufsid ah, waxaase Alle koriyey badankiisii si ciddii ka dambaysa ay calaamad xaqnimada Alle ugu noqoto oyna u halmaamin, markaasaa Alle dejiyey banii israa'iil meel roon kuna arsuqay wanaag, waxay isku khilaafaanna Alle ayaa kala xukumi qiyaamada, saasuuna xaqii u guulaystay baadilikii iyo kibirkiina u jabeen una halaagsameen. **[Yuunus: 90-93].**

94. Haddaad ka shakisan tahay waxaan kugu soo dejinnay warso kuwa akhriya kitaabka hortaa, waxaa kaaga yimid xagga Alle, xaq, ee ha noqonnin kuwa shakiya.

فَإِن كُنتَ فِى شَكٍّ مِّمَّآ أَنزَلْنَآ إِلَيْكَ فَسْـَٔلِ ٱلَّذِينَ يَقْرَءُونَ ٱلْكِتَٰبَ مِن قَبْلِكَ ۚ لَقَدْ جَآءَكَ ٱلْحَقُّ مِن رَّبِّكَ فَلَا تَكُونَنَّ مِنَ ٱلْمُمْتَرِينَ ﴿٩٤﴾

95. Hana ka mid noqon kuwa beeniya aayaadka Alle ood ka mid noqoto kuwa khasaaray.

وَلَا تَكُونَنَّ مِنَ ٱلَّذِينَ كَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ فَتَكُونَ مِنَ ٱلْخَٰسِرِينَ ﴿٩٥﴾

96. Kuway ku waajibtay kalimaddii Allehaa (ciqaab) rumeyn maayaan.

إِنَّ ٱلَّذِينَ حَقَّتْ عَلَيْهِمْ كَلِمَتُ رَبِّكَ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٩٦﴾

97. Xataa haddaad ula timaaddid aayad kasta, intay ka arkaan cadaab daran.

وَلَوْ جَآءَتْهُمْ كُلُّ ءَايَةٍ حَتَّىٰ يَرَوُا۟ ٱلْعَذَابَ ٱلْأَلِيمَ ﴿٩٧﴾

98. Maxay u jiri wayday magaalo rumeysa (xaqa) oo uu anfaco iimaankeedu, laakiin qoomkii

فَلَوْلَا كَانَتْ قَرْيَةٌ ءَامَنَتْ فَنَفَعَهَآ إِيمَٰنُهَآ إِلَّا قَوْمَ يُونُسَ لَمَّآ ءَامَنُوا۟

كَشَفْنَا عَنْهُمْ عَذَابَ ٱلْخِزْيِ فِى ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا وَمَتَّعْنَٰهُمْ إِلَىٰ حِينٍ ﴿٩٨﴾

(Nabi) Yuunus markay rumeeyeen waxaan ka faydnay cadaabkii dulliga ee adduunka, waxaana u raaxaynay tan iyo muddo.

وَلَوْ شَآءَ رَبُّكَ لَءَامَنَ مَن فِى ٱلْأَرْضِ كُلُّهُمْ جَمِيعًا ۚ أَفَأَنتَ تُكْرِهُ ٱلنَّاسَ حَتَّىٰ يَكُونُوا۟ مُؤْمِنِينَ ﴿٩٩﴾

99. Hadduu doono Allehaa waxaa rumayn lahaa waxa dhulka ku sugan oo dhan, ee ma adaa dadka ku qasbi intay ka rumeeyaan (xaqa).

وَمَا كَانَ لِنَفْسٍ أَن تُؤْمِنَ إِلَّا بِإِذْنِ ٱللَّهِ ۚ وَيَجْعَلُ ٱلرِّجْسَ عَلَى ٱلَّذِينَ لَا يَعْقِلُونَ ﴿١٠٠﴾

100. Nafuna ma rumeyso idanka Alle ka dib mooyee, wuxuuna Alle yeelaa xumaanta kuwaan wax kasayn korkooda.

Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) kama shakinnin waxa lagu soo dejin, ee waxaa diidi dadka, mana aha in cidna shaki ka galo xaqa, ciddiise Alle u qoray ciqaab iyo rumeyn la'aan ma rumeyso intay ciqaab daran ka arkaan, waxaana ku habboon inay magaalo kastaba dadkeedu xaqa rumeeyo, waxaana Alle ka toobad aqbalay qoomkii Nabi Yuunus markay rumeeyeen, waxayna ku noolaadeen adduunka tan iyo muddo, hanuunkana Alle ayaa hanta, hadduu doonana waxaa xaqa rumeyn waxa dhulka ku nool oo dhan, mase aha in dadka lagu qasbo rumeynta, nafuna ma rumeeyso idanka Alle la'aantiis, xumaanna waxaa mudan kuwaan kasayn, taasina waxay ku tusin xaqa iyo wanaagga, lana shakiyin xaqa lana warsado Alle ku sugidda xaqa, had iyo jeerna Alle lagu xidhnaado lana warsado hanuun, khayr iyo sugnaan, illeen Alle ayaa awoodda iska leh, wax kastana awooddiisa ku jiraan, waase in si dhaba loogu dhaqmo xaqa. **[Yuunus: 94-100].**

قُلِ ٱنظُرُوا۟ مَاذَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ وَمَا تُغْنِى ٱلْـَٔايَٰتُ وَٱلنُّذُرُ عَن قَوْمٍ لَّا يُؤْمِنُونَ ﴿١٠١﴾

101. Waxaad dhahdaa daya waxa ku sugan samooyinka iyo dhulka waxna kama deeqaan aayado (calaamooyin) iyo digid qoom aan rumeyn (xaqa).

فَهَلْ يَنتَظِرُونَ إِلَّا مِثْلَ أَيَّامِ ٱلَّذِينَ خَلَوْا۟ مِن قَبْلِهِمْ ۚ قُلْ فَٱنتَظِرُوٓا۟ إِنِّى مَعَكُم مِّنَ ٱلْمُنتَظِرِينَ ﴿١٠٢﴾

102. Ma waxay sugi waxaan ahayn ayaamihii kuwii tagay hortood oo kale, waxaad dhahdaa suga anna waan idinla sugiye.

ثُمَّ نُنَجِّي رُسُلَنَا وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ كَذَٰلِكَ حَقًّا عَلَيْنَا نُنجِ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٠٣﴾

103. Markaasaan korinnaa rasuullada iyo kuwa rumeeyey saasaana xaq nagu ah, inaan u korinno mu'miniinta.

قُلْ يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِن كُنتُمْ فِى شَكٍّ مِّن دِينِى فَلَآ أَعْبُدُ ٱلَّذِينَ تَعْبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ وَلَٰكِنْ أَعْبُدُ ٱللَّهَ ٱلَّذِى يَتَوَفَّىٰكُمْ ۖ وَأُمِرْتُ أَنْ أَكُونَ مِنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٠٤﴾

104. Waxaad dhahdaa dadow haddaad tihiin kuwo ka shakisan diintayda caabudi maayo waxaad caabudaysaan oo Alle ka soo hadhay, waxaanse caabudi Allaha idin dili, waxaana lay faray inaan ka mid noqdo mu'miniinta.

وَأَنْ أَقِمْ وَجْهَكَ لِلدِّينِ حَنِيفًا وَلَا تَكُونَنَّ مِنَ ٱلْمُشْرِكِينَ ﴿١٠٥﴾

105. Iyo inaan u jeediyo wajiga diinta anoo toosan hana ka mid noqonnin mushrikiinta.

Dadku waa inay ku waano qaataan calaamooyinka cirka iyo dhulka, waxayse waanadu wax u tartaa kuwa xaqa rumeeya, kuwaan xaqa rumeynse wax uma tarto, ciddii xaqa ka jeedsataa ha sugto wixii ku dhacay gaaladii ka horreeyey oo ciqaaba.

Wuxuuna Alle koriyaa kuwa xaqa rumeeya, diinta islaamkana shaki ma leh, waana in laga fogaado cibaadada wax Alle ka soo hadhay, illeen waxaa cibaado mudan ilaaha, dadka oofsan, farayna in mu'miminta laga mid noqdo, wajigana loo jeediyo xagga Alle, lagana fogaado jidka gaalada. Aayaduhuna wuxuu warkoodu ku kooban yahay in abuurka Alle lagu waano qaato, si dhaba loo caabudo, jidka xun ee baadida ahna laga dheeraado. **[Yuunus: 101-105].**

وَلَا تَدْعُ مِن دُونِ ٱللَّهِ مَا لَا يَنفَعُكَ وَلَا يَضُرُّكَ ۖ فَإِن فَعَلْتَ فَإِنَّكَ إِذًا مِّنَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿١٠٦﴾

106. Hana caabbudin Alle ka sokow waxaan wax ku tarayn kuna dhibayn, haddaad fasho waxaad ka mid noqon daalimiinta.

وَإِن يَمْسَسْكَ ٱللَّهُ بِضُرٍّ فَلَا كَاشِفَ لَهُۥٓ إِلَّا هُوَ ۖ وَإِن يُرِدْكَ بِخَيْرٍ فَلَا رَآدَّ لِفَضْلِهِۦ ۚ يُصِيبُ بِهِۦ مَن يَشَآءُ مِنْ عِبَادِهِۦ ۚ وَهُوَ ٱلْغَفُورُ ٱلرَّحِيمُ ﴿١٠٧﴾

107. Hadduu ku taabsiiyo Alle dhib wax faydi kara oon isaga ahayn ma jiro, hadduu kula doono khayrna wax celin kara fadligiisa ma jiro, wuxuuna

gaadhsiiyaa cidduu doono oo addoomadiisa ka mida, waana dambi dhaafe naxariista.

قُلْ يَـٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ قَدْ جَآءَكُمُ ٱلْحَقُّ مِن رَّبِّكُمْ ۖ فَمَنِ ٱهْتَدَىٰ فَإِنَّمَا يَهْتَدِى لِنَفْسِهِۦ ۖ وَمَن ضَلَّ فَإِنَّمَا يَضِلُّ عَلَيْهَا ۖ وَمَآ أَنَا۠ عَلَيْكُم بِوَكِيلٍ ﴿١٠٨﴾

108. Waxaad dhahdaa dadow waxaa idiinka yimid xagga Alle xaqii, ciddii hanuuntana wuxuu uun u hanuunay naftiisa, cidii dhuntana wuxuu uun u dhumay naftiisa (dhibkeeda), anna korkiinna wakiil uma ihi.

وَٱتَّبِعْ مَا يُوحَىٰٓ إِلَيْكَ وَٱصْبِرْ حَتَّىٰ يَحْكُمَ ٱللَّهُ ۚ وَهُوَ خَيْرُ ٱلْحَـٰكِمِينَ ﴿١٠٩﴾

109. Ee raac waxa laguu waxyooday, samirna inta Alle ka kala xukmin (dadka) isagaa u wanaagsan xaakime.

Waxna ha ka dayin hana caabudin waxaan waxba kuu tarayn, ciddii saas fashana waxay ka mid noqon daalimiinta, hadduu Alle dhib kula doono wax faydi oon isaga ahayn ma jiro, hadduu khayr kula doonana wax celin kara fadligiisa ma jiro, cidduu doono yuuna siiyaa naxariis, waana danbi dhaafe naxariista. Dadkana xaqbaa u yimid ciddii ku hanuuntana wuxuu wax u taray naftiisa, ciddii dhuntana wuxuu uun dhibay naftiisa, Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) cidna ilaaliye uma aha, wuxuuna Alle faray Nabiga iyo dadka kalaba inay raacaan xaqa Alle u waxyooday Nabiga, adkaystaanna inta Alle ka kala xukmin, illeen Alle ayaa xukunkiisu caadil yahaye, suuradduna waxay ku dhammaatay in xaqa lagu fara adkaado lana raaco, laguna samro oo loo adkaysto arrintaas. **[Yuunus: 106-109].**

Suurat Huud

سُورَةُ هُودٍ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

الٓرۚ كِتَٰبٌ أُحْكِمَتْ ءَايَٰتُهُۥ ثُمَّ فُصِّلَتْ مِن لَّدُنْ حَكِيمٍ خَبِيرٍ ﴿١﴾

1. Erayga hore wuxuu ku tusin mucjisada quraanka, kitaabka quraanka ahna waa mid la sugay aayadihiisa, markaas lagana caddeeyey Allaha falka san ee wax walba og xaggiisa.

أَلَّا تَعْبُدُوٓاْ إِلَّا ٱللَّهَۚ إِنَّنِى لَكُم مِّنْهُ نَذِيرٌ وَبَشِيرٌ ﴿٢﴾

2. Inaydaan caabudin Alle mooyee wax kale, anugu waxaan idiinka ahay xagga Alle dige bishaareeya.

وَأَنِ ٱسْتَغْفِرُواْ رَبَّكُمْ ثُمَّ تُوبُوٓاْ إِلَيْهِ يُمَتِّعْكُم مَّتَٰعًا حَسَنًا إِلَىٰٓ أَجَلٍ مُّسَمًّى وَيُؤْتِ كُلَّ ذِى فَضْلٍ فَضْلَهُۥۖ وَإِن تَوَلَّوْاْ فَإِنِّىٓ أَخَافُ عَلَيْكُمْ عَذَابَ يَوْمٍ كَبِيرٍ ﴿٣﴾

3. Dambi dhaafna warsada Alle una toobad keena wuxuu idiinku raaxayn nolol wanaagsan tan iyo muddo, wuxuuna siin cid kasta oo dheeraad leh (fadhli) dheeraadkiisa (fadligiisa) haddaad jeedsataanna anugu waxaan idiinka cabsan cadaab maalin wayn.

إِلَى ٱللَّهِ مَرْجِعُكُمْۖ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿٤﴾

4. Xagga Alle ayaa noqoshadiinnu tahay, wax kastana wuu karaa.

Suuraddani waa suurad wax badan ka warrantay, waxaana dhacday in Nabigii (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) lagu yidhi: waxaan kugu aragnaa cirro, markaasuu yidhi waxaa i cirraysay huud iyo walaalaheed,

quraankuna waa wax sugan oo cad oo xaggaa Alle ka soo degay, farina inaan Alle mooyee wax kale la caabudin, Nabiguna waa dige bishaareeya, waana in Alle loo toobad keeno dambi dhaafna la warsado. **[Huud: 1-4].**

5. Waxay iilayaan laabtooda inay iska qariyaan Alle, markay isku dadi maryahooda waa og yahay Alle waxay qarsan iyo waxay muujin, illeen Alle waa og yahay waxa laabta ku sugane.

أَلَآ إِنَّهُمۡ يَثۡنُونَ صُدُورَهُمۡ لِيَسۡتَخۡفُواْ مِنۡهُۚ أَلَا حِينَ يَسۡتَغۡشُونَ ثِيَابَهُمۡ يَعۡلَمُ مَا يُسِرُّونَ وَمَا يُعۡلِنُونَۚ إِنَّهُۥ عَلِيمُۢ بِذَاتِ ٱلصُّدُورِ ٥

6. Dhul socod kasta risqigeedu wuxuu saaran yahay Alle wuxuuna og yahay meeshey ku hoyan ooy u dheelman, dhammaanna kitaab cad yey ku sugan yihiin.

* وَمَا مِن دَآبَّةٖ فِي ٱلۡأَرۡضِ إِلَّا عَلَى ٱللَّهِ رِزۡقُهَا وَيَعۡلَمُ مُسۡتَقَرَّهَا وَمُسۡتَوۡدَعَهَاۚ كُلّٞ فِي كِتَٰبٖ مُّبِينٖ ٦

7. Alle waa kan ku abuuray samooyinka iyo dhulka lix maalmood, wuxuuna ahaa carshigiisu biyo korkood inuu idin imtixaamo kiinna camalka wanaagsan, haddaad dhahdo waa laydin soo bixin geeri ka dib waxay odhan kuwii gaaloobay: kani waxaan sixir cad ahayn ma aha.

وَهُوَ ٱلَّذِي خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضَ فِي سِتَّةِ أَيَّامٖ وَكَانَ عَرۡشُهُۥ عَلَى ٱلۡمَآءِ لِيَبۡلُوَكُمۡ أَيُّكُمۡ أَحۡسَنُ عَمَلٗاۗ وَلَئِن قُلۡتَ إِنَّكُم مَّبۡعُوثُونَ مِنۢ بَعۡدِ ٱلۡمَوۡتِ لَيَقُولَنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓاْ إِنۡ هَٰذَآ إِلَّا سِحۡرٞ مُّبِينٞ ٧

Gaaladii wax kasta oo xaqdiidda ah way sameeyeen xataa waxay isku dadeen maryo si ayna u maqlin xaqa ama u arkin Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) Allese waa og yahay waxay qarsan iyo waxay muujisan, illeen waxa qalbiga ku jiruu ogyahaye.

Wax kasta oo dhulka ku noolla Alle ayaa cunnadeeda ballan qaaday ogna meeshay ku sugan tahay iyo meeshay ku hoyan, wax kastana wuxuu ku sugan yahay kitaab cad, Alle ayaana ku abuuray samooyinka iyo dhulka lix maalmood carshigiisuna ahaa biyaha korkooda inuu imtixaamo dadka kooda camal fiican, hadduu Nabigu gaalada ku dhaho waa laydin soo bixin geeri ka dib waxay odhan kuwii gaaloobay: kani waa sixir cad, saasayna xaqa u diidaan si doqonnimo iyo madax adayg ah. **[Huud: 5-7].**

وَلَئِنْ أَخَّرْنَا عَنْهُمُ ٱلْعَذَابَ إِلَىٰٓ أُمَّةٍ مَّعْدُودَةٍ لَّيَقُولُنَّ مَا يَحْبِسُهُۥٓ ۗ أَلَا يَوْمَ يَأْتِيهِمْ لَيْسَ مَصْرُوفًا عَنْهُمْ وَحَاقَ بِهِم مَّا كَانُوا۟ بِهِۦ يَسْتَهْزِءُونَ ﴿٨﴾

8. Haddaan dib uga dhigno cadaabka xaggooda tan iyo muddo tirsan waxay odhan maxaa celinaya, maalintuuse u yimaaddo mid laga iilo ma aha, waxaana ku dhaca waxay ku jeesjeesi (ciqaabtiisii).

وَلَئِنْ أَذَقْنَا ٱلْإِنسَٰنَ مِنَّا رَحْمَةً ثُمَّ نَزَعْنَٰهَا مِنْهُ إِنَّهُۥ لَيَـُٔوسٌ كَفُورٌ ﴿٩﴾

9. Haddaan dhadhansiinno dadka naxariis xaggannaga ah markaas aan ka qaadno wuxuu noqdaa mid quusasho badan oo dafir badan.

وَلَئِنْ أَذَقْنَٰهُ نَعْمَآءَ بَعْدَ ضَرَّآءَ مَسَّتْهُ لَيَقُولَنَّ ذَهَبَ ٱلسَّيِّـَٔاتُ عَنِّىٓ ۚ إِنَّهُۥ لَفَرِحٌ فَخُورٌ ﴿١٠﴾

10. Haddaan dhadhansiinno dadka nicmo dhib taabtay ka dib wuxuu dhihi: waxaa iga tagay xumaantii isagoo farax iyo faan ku sugan.

إِلَّا ٱلَّذِينَ صَبَرُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ أُو۟لَٰٓئِكَ لَهُم مَّغْفِرَةٌ وَأَجْرٌ كَبِيرٌ ﴿١١﴾

11. Kuwa samra ee camal fiican fala mooyee, kuwaasna waxaa u sugnaaday dambi dhaaf iyo ajir wayn.

Waxaa ka mida gaalada dabeecaddooda in haddii ciqaabta dib looga dhigo ay dheerersadaan oy dhahaan maxaa reebaya, maalintuuse cadaab u yimaaddo wax la leexin ma jiro, waxaana ku dhici waxay ku jees jeesayeen ciqaabtiissii, haddii dadka Alle naxariis dhadhansiiyo markaas ka wareejiyo waxaa ka mida kuwo quusan oo gaaloobi, haddii nicmo la siiyo dhib ka dibna waxay dhahaan iyagoo faani oo kibri dhibkii waa tagay, kuwa xaqa rumeeyeyse oo samra oo camal fiican fala iyagu kuma jiraan saasna ma aha, ee waxay ogyihiin in wax walba awwoodda Alle ku jiraan uuna dadka u nicmeyn, uuna dhibi, inuu imtixaamo ciddii rumeysa iyo tii diidda xaqa, kuwa samo falase waxaa u sugnaaday oy heli dambi dhaaf iyo ajir wayn. **[Huud: 8-11].**

فَلَعَلَّكَ تَارِكٌۢ بَعْضَ مَا يُوحَىٰٓ إِلَيْكَ وَضَآئِقٌۢ بِهِۦ صَدْرُكَ أَن يَقُولُوا۟ لَوْلَآ أُنزِلَ عَلَيْهِ كَنزٌ أَوْ جَآءَ مَعَهُۥ مَلَكٌ ۚ

12. Waxaad u dhawdahay inaad ka tagto waxa laguu waxyoon qaarkiis oy la cidhiidhyanto laabtaadu inay dhahaan maa

lagu soo dejiyo korkiisa kansi ama la yimaaddo malag, adugu waxaad uun tahay dige, Alle na wax kasta wuxuu u yahay (ilaaliye) wakiil.

إِنَّمَآ أَنتَ نَذِيرٌۚ وَٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَيۡءٖ وَكِيلٌ ١٢

13. Mise waxay odhan wuu been abuurtay, waxaad dhahdaa keena toban suuradood oo la mida oo la been abuurtay una yeedha ciddaad kartaan oo Alle ka soo hadhay haddaad run sheegaysaan.

أَمۡ يَقُولُونَ ٱفۡتَرَىٰهُۖ قُلۡ فَأۡتُواْ بِعَشۡرِ سُوَرٖ مِّثۡلِهِۦ مُفۡتَرَيَٰتٖ وَٱدۡعُواْ مَنِ ٱسۡتَطَعۡتُم مِّن دُونِ ٱللَّهِ إِن كُنتُمۡ صَٰدِقِينَ ١٣

14. Haddayna idin ajiibin «yeelin» ogaada in lagu soo dejiyey quraanka ogaansho Alle iyo inaan Alle mooyee ku xaq lugu caabudaa jirin, ee ma islaamaysaan.

فَإِلَّمۡ يَسۡتَجِيبُواْ لَكُمۡ فَٱعۡلَمُوٓاْ أَنَّمَآ أُنزِلَ بِعِلۡمِ ٱللَّهِ وَأَن لَّآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَۖ فَهَلۡ أَنتُم مُّسۡلِمُونَ ١٤

15. Ciddii dooni nolosha adduunyo iyo quruxdeeda waxaan u dhammaynaynaa camalkooda dhexdeeda, lagamana nusqaamiyo.

مَن كَانَ يُرِيدُ ٱلۡحَيَوٰةَ ٱلدُّنۡيَا وَزِينَتَهَا نُوَفِّ إِلَيۡهِمۡ أَعۡمَٰلَهُمۡ فِيهَا وَهُمۡ فِيهَا لَا يُبۡخَسُونَ ١٥

16. Kuwaasuna waa kuwaan ku lahayn aakhiro waxaan naar ahayn, waxaana buray waxay ku sameeyeen dhexdeeda, waxaana baadhila (wax kama jire ah) waxay falayeen.

أُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ لَيۡسَ لَهُمۡ فِي ٱلۡأٓخِرَةِ إِلَّا ٱلنَّارُۖ وَحَبِطَ مَا صَنَعُواْ فِيهَا وَبَٰطِلٞ مَّا كَانُواْ يَعۡمَلُونَ ١٦

Alle wuxuu Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) u soo jeediyey inuusan u aabo yeelin warka gaalada iyo madax adayggooda, lana cidhiidhyamin waxay ka doonayaan oo ah xoolo badan iyo malaa'ig keenid, illeen shaqadiisu waa xaq gaadhsiine, Alle ayaase wax walba ilaaliya hadduu Nabigu quraanka been abuurtay iyaba ha keenaan toban suuradood oo la mida oo la been abuuray hana la kaashadeen cidday karaan hadday run sheegi,

hadday yeeli waayaanna ha ogaadeen in quraanku ku soo degey ogaanshaha Alle iyo inaan Alle mooyee ku xaq lugu caabudaa jirin ee may islaamaan, ciddii doonta adduunyo iyo quruxdeed waannu ka siin camalkooda oon laga nusqaamineyn dhexdeeda, aakharana kuwaasu wax kuma leh, wuuna buray waxay faleen, waxaana baadila camalkoodii, Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: kuwa istustusa waxaa lagu siin wanaaggooda adduunka, aakharana way khasaari. **[Huud: 12-16].**

أَفَمَن كَانَ عَلَىٰ بَيِّنَةٍ مِّن رَّبِّهِۦ وَيَتْلُوهُ شَاهِدٌ مِّنْهُ وَمِن قَبْلِهِۦ كِتَٰبُ مُوسَىٰٓ إِمَامًا وَرَحْمَةً ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ يُؤْمِنُونَ بِهِۦ ۚ وَمَن يَكْفُرْ بِهِۦ مِنَ ٱلْأَحْزَابِ فَٱلنَّارُ مَوْعِدُهُۥ ۚ فَلَا تَكُ فِى مِرْيَةٍ مِّنْهُ ۚ إِنَّهُ ٱلْحَقُّ مِن رَّبِّكَ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿١٧﴾

17. Ruux ku sugan (xujo) cad oo Allehiis, uu raacina marag Alle, hortiisna ahaayeen kitaabkii Muuse isagoo imaam iyo naxariis ah ma la midbaa mid adduunyo uun doonay, kuwaas fiican way rumeyn quraanka, ciddii ka gaalowda quraanka iyo Nabiga oo xisbiyada ka mida naarbaa ballan u ah, ee ha noqon mid shakiya xaggiiisa, isagu waa xaq Alle ka ahaadaye, laakiin dadka badankiis ma rumeeyaan.

وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنِ ٱفْتَرَىٰ عَلَى ٱللَّهِ كَذِبًا ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ يُعْرَضُونَ عَلَىٰ رَبِّهِمْ وَيَقُولُ ٱلْأَشْهَٰدُ هَٰٓؤُلَآءِ ٱلَّذِينَ كَذَبُوا۟ عَلَىٰ رَبِّهِمْ ۚ أَلَا لَعْنَةُ ٱللَّهِ عَلَى ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿١٨﴾

18. Yaa ka dulmi badan ruux ku abuurtay Alle been, kuwaas waxaa loo bandhigi Rabbigood, waxayna odhan maraggu kuwaasu waa kuwa ku been abuurtay Rabbigood, lacnadi ha ahaato daalimiinta korkooda.

ٱلَّذِينَ يَصُدُّونَ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ وَيَبْغُونَهَا عِوَجًا وَهُم بِٱلْءَاخِرَةِ هُمْ كَٰفِرُونَ ﴿١٩﴾

19. Ee ah kuwa ka jeedsada jidka Alle, lana dooni qallooc, aakharana ka gaaloobay.

Mu'miniinta xaalkoodu waa mid waafaqsan abuurka Alle ee ah diinta, siduu Rasuulku (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) yidhi: cid kastoo la dhalo waxaa lagu dhaala diinta islaamka, ee labada waalid unbaa yuhuud ka dhigta ama nasaara ama majuusi. (Waxaa wariyey Buhkhaari iyo Muslim). Diinta dhabta ahna waa tan islaamka, waxaana saa marag furay Nabiyadii Alle

oos ka mid ahaa Nabi Muuse, ciddii ka gaalowda quraanka ama Nabiga oo dadka ka mida cidduu dooni ha noqdee naar baa ballan u ah, quraankuna shaki ma leh inuu xaq xagga Alle ka yimid yahay, dadka badankiisuse ma rumeeyaan, cid ka dulmi badanna ma jirto ruux ku been abuurtay Alle, kuwaasna waxaa loo bandhigi Rabbigood, maragguna wuxuu odhan oo ah dadka qiyaamada jooga kuwani waa kuwii ku been abuurtay Rabbigood lacnadi ha ku dhacdo daalimiinta jidka Alle ka leexisa dadka oo qalloocna la doonta aakharana ka gaalooba. Dhabtii waa aayado la yaab leh oo waa weyn. **[Huud: 17-19].**

أُوْلَٰٓئِكَ لَمْ يَكُونُواْ مُعْجِزِينَ فِي ٱلْأَرْضِ وَمَا كَانَ لَهُم مِّن دُونِ ٱللَّهِ مِنْ أَوْلِيَآءَ يُضَٰعَفُ لَهُمُ ٱلْعَذَابُ ۚ مَا كَانُواْ يَسْتَطِيعُونَ ٱلسَّمْعَ وَمَا كَانُواْ يُبْصِرُونَ ﴿٢٠﴾

20. Kuwaasu ma aha kuwa ku daalin Alle dhulka dhexdiisa umana sugna wax Alle ka soo hadhay oo u gargaari waxaana loo laablaabi cadaabka, mana karaan inay (xaqa) maqlaan ama arkaan.

أُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ خَسِرُوٓاْ أَنفُسَهُمْ وَضَلَّ عَنْهُم مَّا كَانُواْ يَفْتَرُونَ ﴿٢١﴾

21. Kuwaasu waa kuwa khasaariyey naftooda waxaana ka dhumay waxay been abuurteen.

لَا جَرَمَ أَنَّهُمْ فِي ٱلْءَاخِرَةِ هُمُ ٱلْأَخْسَرُونَ ﴿٢٢﴾

22. Waxaana sugan inay kuwaasu aakharo iyagu uun khasaaro badnaadeen.

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ وَأَخْبَتُوٓاْ إِلَىٰ رَبِّهِمْ أُوْلَٰٓئِكَ أَصْحَٰبُ ٱلْجَنَّةِ ۖ هُمْ فِيهَا خَٰلِدُونَ ﴿٢٣﴾

23. Kuwa rumeeyey xaqa oo camal fiican falay oo u noqday Rabbigood kuwaasu waa jannada ehelkeeda wayna ku dhex waari.

۞ مَثَلُ ٱلْفَرِيقَيْنِ كَٱلْأَعْمَىٰ وَٱلْأَصَمِّ وَٱلْبَصِيرِ وَٱلسَّمِيعِ ۚ هَلْ يَسْتَوِيَانِ مَثَلًا ۚ أَفَلَا تَذَكَّرُونَ ﴿٢٤﴾

24. Waxay la mid yihiin labada kooxood mid indhala' iyo mid dhaga la' iyo mid wax arka iyo mid wax maqli, ma siman yihiin tusaale ahaan, miyeydaan wax xusuusaneyn.

Cid ilaahay ka carari karta ma jirto, cid wax ka faydi oo Alle ka soo hadhayna ma jirto, ciddii xaqa ka indho beesha ama maqli waydana waxaa loo laab laabi cadaabka, waana kuwa khasaariyey naftooda kana dhumay waxay been abuuran jireen, waana kuwa khasaaray aakharo, kuwa xaqa rumeeyey oo camal

fiican falayna oo Alle u toobad keena waxay mudan janno o ku waari, labada kooxood oo ah kuwa xaqa rumeeyey iyo gaalada waxay la mid yihiin mid wax arki waxna maqli iyo indhoole dhaga la' mana sinna ciddii wax xusuusan, gaalo waa indho iyo dhaga la'dahay, mu'minna waa wax arke wax maqli, yaanan lagu khaldamin wax araggooda adduun, xooluhuba waxbay arkaan. **[Huud: 20-24].**

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا نُوحًا إِلَىٰ قَوْمِهِۦٓ إِنِّى لَكُمْ نَذِيرٌ مُّبِينٌ ﴿٢٥﴾

25. Waxaan u dirray (Nabi) Nuux qoomkiisii (isagoo leh): waxaan idiin ahay dige cad.

أَن لَّا تَعْبُدُوٓا۟ إِلَّا ٱللَّهَ ۖ إِنِّىٓ أَخَافُ عَلَيْكُمْ عَذَابَ يَوْمٍ أَلِيمٍ ﴿٢٦﴾

26. Inaydaan caabudin wax Alle ka soo hadhay, waxaan idiinka cabsan korkiinna cadaab maalin daran.

فَقَالَ ٱلْمَلَأُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مِن قَوْمِهِۦ مَا نَرَىٰكَ إِلَّا بَشَرًا مِّثْلَنَا وَمَا نَرَىٰكَ ٱتَّبَعَكَ إِلَّا ٱلَّذِينَ هُمْ أَرَاذِلُنَا بَادِىَ ٱلرَّأْىِ ۖ وَمَا نَرَىٰ لَكُمْ عَلَيْنَا مِن فَضْلٍ بَلْ نَظُنُّكُمْ كَٰذِبِينَ ﴿٢٧﴾

27. Waxayna dheheen madaxdii gaallowday oo qoomkiisa ka mida waxaan bashar nala mida ahayn kuguma aragno, kugumana aragno inuu ku raacay waxaan ahayn kuwannaga xun xun ee ku deg dega ra'yiga, kuugumana aragno korkannaga wax dheeraada waxaanse idiin malaynaynaa beenaalayaal.

قَالَ يَٰقَوْمِ أَرَءَيْتُمْ إِن كُنتُ عَلَىٰ بَيِّنَةٍ مِّن رَّبِّى وَءَاتَىٰنِى رَحْمَةً مِّنْ عِندِهِۦ فَعُمِّيَتْ عَلَيْكُمْ ۚ أَنُلْزِمُكُمُوهَا وَأَنتُمْ لَهَا كَٰرِهُونَ ﴿٢٨﴾

28. Wuxuuna yidhi: qoomkayow ka warrama haddaan xujo (cad) oo Allehay ku sugnahay uu ina siiyey naxariis xaggiisa oo laydinka indho tiray miyaan idinku laasimin karraa idinkoo nici.

Qisada Nabi Nuux wax badan yey quraanka ku soo aroortay, wuxuuna ahaa Nabigii ugu horreeyey ee si cad ugu yeedha dadka, halkanna markuu ugu yeedhay qoomkiisii caabudidda Ilaahay kaliya ugana digay cadaab daran waxay sidii caadada u ahayd gaaladii madaxda ahayd ee qoomkiisu ugu jawaabeen inuu dadka la mid yahay dad xun xunna raaceen wax dheeraad ahna uusan

lahayn ey una maleyn inuu been sheegi, wuxuuse ku sugan yahay xujo cad oo Alle iyo naxariis uu ka siiyey agtiisa, oyse ka indho beeleen uusan qasabna ku lahayn iyagoo nici xaqa, taasina waxay muujin dabeecad wanaagga Nabiyada, inta xaqa ku raacda iyo inayna raacidda diintu qasab ku imaanayn ee ciddii doontana raaci, tii kalana aan xoog lagu galinayn, waxaase loogu sheegi si cad oo qabow oo wanaaga, ciqaabtana Alle ayaa hanta. **[Huud: 25-28].**

29. Qoomkayow idin warsan maayo xoolo, ajirkayga Alle ayaa haya, mana eryayo kuwa xaqa rumeeyey illeen iyagu waxay la kulmi Rabbigoode, waxaanse idinku arkaa qoom jaahiliina.

وَيَٰقَوۡمِ لَآ أَسۡـَٔلُكُمۡ عَلَيۡهِ مَالًاۖ إِنۡ أَجۡرِيَ إِلَّا عَلَى ٱللَّهِۚ وَمَآ أَنَا۠ بِطَارِدِ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْۚ إِنَّهُم مُّلَٰقُواْ رَبِّهِمۡ وَلَٰكِنِّيٓ أَرَىٰكُمۡ قَوۡمٗا تَجۡهَلُونَ ٢٩

30. Qoomkayow yaa iiga gargaari Alle haddaan eryo kuwaas (xaqa rumeeyey) miyeydaan wax xusuusanayn.

وَيَٰقَوۡمِ مَن يَنصُرُنِي مِنَ ٱللَّهِ إِن طَرَدتُّهُمۡۚ أَفَلَا تَذَكَّرُونَ ٣٠

31. Idinma dhahayo waxaa agtayda ah khasaa'intii Alle mana ogi waxa maqan, idinmana odhanaayo waxaan ahay malaa'ig, idinmana odhanaayo kuway yasayso indhihiinnu ma siinayo Alle khayr, Alle ayaa og waxa naftooda ku sugan, markaas waxaan ka mid noqon daalimiinta.

وَلَآ أَقُولُ لَكُمۡ عِندِي خَزَآئِنُ ٱللَّهِ وَلَآ أَعۡلَمُ ٱلۡغَيۡبَ وَلَآ أَقُولُ إِنِّي مَلَكٞ وَلَآ أَقُولُ لِلَّذِينَ تَزۡدَرِيٓ أَعۡيُنُكُمۡ لَن يُؤۡتِيَهُمُ ٱللَّهُ خَيۡرًاۖ ٱللَّهُ أَعۡلَمُ بِمَا فِيٓ أَنفُسِهِمۡ إِنِّيٓ إِذٗا لَّمِنَ ٱلظَّٰلِمِينَ ٣١

Wuxuu u sheegay Nabi Nuux qoomkiisa inuusan wax ujuura ah ka warsanayn xaqa gaadhsiintiisa, uusan fogaynaynna kuwa xaqa rumeeyey ee ka cabsada xaalkaas, illeen waa arrin jaahilnimee, hadduu eryo dadkaasna wax Alle uga gargaari ma jiro, mana u sheegan in khasnadaha Alle agtiisa tahay, ama waxa maqan og yahay, ama malaa'ig yahay, mana u sheegin in mu'miniinta ay xaqirayaan uusan Alle khayr siinayn, Alle ayaa og xaalkooda kuna shaqo leh, ciddii xumaysana waxay ka mid noqon daalimiinta, waana taas xaalka xaq yeedhayaasha iyo gaalada xaqa diidda. **[Huud: 29-31].**

32. Waxay dheheen Nuuxow waad nala doodday ood badisay la doodkannaga, ee noo keen waxaad noo yaboohayso haddaad run sheegi.

قَالُواْ يَٰنُوحُ قَدۡ جَٰدَلۡتَنَا فَأَكۡثَرۡتَ جِدَالَنَا فَأۡتِنَا بِمَا تَعِدُنَآ إِن كُنتَ مِنَ ٱلصَّٰدِقِينَ ٣٢

33. Wuxuuna yidhi waxaa uun idiin keeni (kara) Alle hadduu doono, mana tihiin kuwo daalin Alle.

قَالَ إِنَّمَا يَأۡتِيكُم بِهِ ٱللَّهُ إِن شَآءَ وَمَآ أَنتُم بِمُعۡجِزِينَ ٣٣

34. Waxna idiinma tarto naseexadaydu haddaan doono inaan idiin naseexeeyo hadduu Alle doono inuu idin baadiyeeyo, illeen waa Rabbigiine xagiisaana laydiin celin.

وَلَا يَنفَعُكُمۡ نُصۡحِيٓ إِنۡ أَرَدتُّ أَنۡ أَنصَحَ لَكُمۡ إِن كَانَ ٱللَّهُ يُرِيدُ أَن يُغۡوِيَكُمۡۚ هُوَ رَبُّكُمۡ وَإِلَيۡهِ تُرۡجَعُونَ ٣٤

35. Mise waxay dhihi isagaa been abuurtay, waxaad dhahdaa haddaan been abuurto dambigaygu anuu i saaran yahay, anuguna bari baan ka ahay waxaad dambaabtaan.

أَمۡ يَقُولُونَ ٱفۡتَرَىٰهُۖ قُلۡ إِنِ ٱفۡتَرَيۡتُهُۥ فَعَلَيَّ إِجۡرَامِي وَأَنَا۠ بَرِيٓءٞ مِّمَّا تُجۡرِمُونَ ٣٥

Gaaladii hadalkii yey ku adkeeyeen Nabi Nuux waxayna dheheen waad nala murantay ood badisay murankii ee noo keen ciqaabtaad noogu gooddin haddaad run sheegayso, taasina waa caadada xaq diidayaasha had iyo jeer inay warsadaan Nabiyada waxaasoo kale, wuxuuse ugu jawaabay Nabi Nuux in keenidda arrintaas Alle uun karo kuna shaqo leeyahay hadduu doono, wax daalin karana uusan jirin, naseexana ayan wax u tarayn cidduu Alle dhumiyo markay xaqa diiddo oo ka jeedsato, waxayna ku sheegeen inuu been abuurtay xaalkuu la yimid, wuxuuse ugu jawaabay in dambigiisu isaga saaran yahay, isna dambigooda ka madaxbannaan yahay, taasina waxay ku tusin in Nabiyaduna isku hadal yihiin xaq diidayaashuna isku war iyo dabeeco yihiin. **[Huud: 32-35].**

36. Waxaa loo waxyooday Nabi Nuux inuusan ku rumeynayn qoomkaaga inta ku rumaysay waxaan ahayn ee ha u murugoon waxay fali.

وَأُوحِيَ إِلَىٰ نُوحٍ أَنَّهُۥ لَن يُؤۡمِنَ مِن قَوۡمِكَ إِلَّا مَن قَدۡ ءَامَنَ فَلَا تَبۡتَئِسۡ بِمَا كَانُواْ يَفۡعَلُونَ ٣٦

وَٱصۡنَعِ ٱلۡفُلۡكَ بِأَعۡيُنِنَا وَوَحۡيِنَا وَلَا تُخَٰطِبۡنِي فِي ٱلَّذِينَ ظَلَمُوٓاْۖ إِنَّهُم مُّغۡرَقُونَ ٣٧

37. Samaysana doon, annagoo ku dhawri, kuuna waxyoon, hana igula hadlin (xaalka) kuwii dulmi falay, waa la maansheyne.

وَيَصۡنَعُ ٱلۡفُلۡكَ وَكُلَّمَا مَرَّ عَلَيۡهِ مَلَأٞ مِّن قَوۡمِهِۦ سَخِرُواْ مِنۡهُۚ قَالَ إِن تَسۡخَرُواْ مِنَّا فَإِنَّا نَسۡخَرُ مِنكُمۡ كَمَا تَسۡخَرُونَ ٣٨

38. Wuxuu samaynayey doon mar kasta oo qoomkiisa koox ka mida martana way ku jees jeesayeen wuxuuna ku dhahayey haddaad nagu jees jeestaan anaguna waan idinku jees jeesi saad u jees jeesaysaan.

فَسَوۡفَ تَعۡلَمُونَ مَن يَأۡتِيهِ عَذَابٞ يُخۡزِيهِ وَيَحِلُّ عَلَيۡهِ عَذَابٞ مُّقِيمٞ ٣٩

39. Waadna ogaan doontaan cidduu u yimaaddo cadaab dulleeya kuna dago cadaab joogta ah.

حَتَّىٰٓ إِذَا جَآءَ أَمۡرُنَا وَفَارَ ٱلتَّنُّورُ قُلۡنَا ٱحۡمِلۡ فِيهَا مِن كُلّٖ زَوۡجَيۡنِ ٱثۡنَيۡنِ وَأَهۡلَكَ إِلَّا مَن سَبَقَ عَلَيۡهِ ٱلۡقَوۡلُ وَمَنۡ ءَامَنَۚ وَمَآ ءَامَنَ مَعَهُۥٓ إِلَّا قَلِيلٞ ٤٠

40. Markuu yimid amarkannagii oo tannuurkii burqaday waxaan ku nidhi ku xambaar doonida nooc kasta labo iyo xaaskaaga (ehelkaaga), ciddii dhumid iyo halaag loo xukumay mooyee, iyo ciddii rumaysay xaqa (iyana ku xambaar) mana rumeynin wax yar mooyee.

Nabi Nuux wuxuu Alle u waxyooday inuusan qoomkiisa ka rumeyneyn xaqa inta horay u rumeysay mooyee waana inuusan u murugoon waxay fali oo xumaana, samaystana doon isagoo Alle ilaalin una waxyoon, uusan Alle na kala hadlin xaalka kuwaas dulmiga falay illeen waa la maansheyne, wuxuuna samaynayey doontii markay maraanna way ku jeesjeesayeen, wuxuuna ku dhahayey haddaad nagu jees jeestaan waannu idinku jees jeesi waadna ogaan doontaan cidduu u yimaaddo cadaab dulleeya kuna dhaco cadaab joogta ah, markuu yimid amarkii Alle biyihiina ka soo burqadeen tannuurka yaa Alle ku yidhi Nabi Nuux ku xambaar doonta nooc kasta labo, cidda ciqaabi u sugnaatay mooyee, inta ku rumaysayna ku xambaar, wax yar baana rumeeyey, taasina waxay kuu muujin in mu'miniintu ku sugan yihiin ujeeddo kaliya. **[Huud: 36-40].**

41. Wuxuuna yidhi ku kora magaca Alle oy kuna socon kuna joogsan Rabbigeyna waa dambi dhaafe naxariista.

* وَقَالَ ٱرۡكَبُواْ فِيهَا بِسۡمِ ٱللَّهِ مَجۡرٖىهَا وَمُرۡسَىٰهَآۚ إِنَّ رَبِّي لَغَفُورٞ رَّحِيمٞ ٤١

42. Wayna la socotay hir dhexdiis oo buuro la mida wuxuuna u dhawaaqay Nabi Nuux wiilkiisii wuxuuna ahaa meel ka gaar ah (isagoo leh): wiilkaygow nala soo kor hana la jirin gaalada.

وَهِيَ تَجۡرِي بِهِمۡ فِي مَوۡجٖ كَٱلۡجِبَالِ وَنَادَىٰ نُوحٌ ٱبۡنَهُۥ وَكَانَ فِي مَعۡزِلٖ يَٰبُنَيَّ ٱرۡكَب مَّعَنَا وَلَا تَكُن مَّعَ ٱلۡكَٰفِرِينَ ٤٢

43. Wuxuuna ku yidhi waxaan u dunmi buur iga dhawrta biyaha wuxuu yidhi (Nabi Nuux) wax celin kara maanta amarka Alle ma jiro cid Alle u naxariistay mooyee, waxaana kala dhex maray hirkii wuxuuna ka mid noqday wiilkii kuwa la maansheeyey.

قَالَ سَـَٔاوِيٓ إِلَىٰ جَبَلٖ يَعۡصِمُنِي مِنَ ٱلۡمَآءِۚ قَالَ لَا عَاصِمَ ٱلۡيَوۡمَ مِنۡ أَمۡرِ ٱللَّهِ إِلَّا مَن رَّحِمَۚ وَحَالَ بَيۡنَهُمَا ٱلۡمَوۡجُ فَكَانَ مِنَ ٱلۡمُغۡرَقِينَ ٤٣

44. Waxaana la yidhi: dhulow liq biyahaaga samooyna qaad (jooji) waxaana la yareeyey «la gudhiyey» biyihii waxaana la xukumay amarkii waxayna ku dul ekaatay doontii buurtii Juudi waxaana la yidhi fogaansho haw sugnaato qoomka daalimiinta ah.

وَقِيلَ يَٰٓأَرۡضُ ٱبۡلَعِي مَآءَكِ وَيَٰسَمَآءُ أَقۡلِعِي وَغِيضَ ٱلۡمَآءُ وَقُضِيَ ٱلۡأَمۡرُ وَٱسۡتَوَتۡ عَلَى ٱلۡجُودِيِّۖ وَقِيلَ بُعۡدٗا لِّلۡقَوۡمِ ٱلظَّٰلِمِينَ ٤٤

Wuxuu yidhi Nabi Nuux: ku kora doonta magaca Alle ee ay ku socon kuna joogsan illeen waa dambi dhaafe naxariistee, wayna la socotay hirka dhexdiisa iyadoo buur oo kala ah, Nabi Nuuxna wuxuu u dhawaaqay wiilkiisa oo ka durugsan wuxuuna ku yidhi: wiilkayow nala soo kor hana ahaan la jiraha gaalada, wuxuuse sheegay inuu kori buur ka dhawrta biyaha, wuxuuse ku yidhi Nabi Nuux maanta wax celin kara amarka Alle ma jiro cid Alle u naxariisto mooyee, hirkiibaana kala dhex maray wuxuuna ka mid noqday kuwa la maansheeyey,

biyihiina waa gudheen oo joogsadeen amarkiina waa la xukumay waxayna ku ekaatay buurtii Juudi halaag baana ku dhacay daalimiintii, waxaa laga wariyey Ibnu Cabbaas in Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) yidhi: ummaddayda inay maanshoodaan waxaa ka nabadgelinaya inay akhriyaan magaca Alle markay doon kori. Waa xadiith aad u taag daran. Qisada Nabi Nuux iyo qoomkiisa iyo sida loo halaagay daalimiintii waa wax lagu waano qaato. **[Huud: 41-44].**

وَنَادَىٰ نُوحٌ رَّبَّهُۥ فَقَالَ رَبِّ إِنَّ ٱبۡنِي مِنۡ أَهۡلِي وَإِنَّ وَعۡدَكَ ٱلۡحَقُّ وَأَنتَ أَحۡكَمُ ٱلۡحَٰكِمِينَ ﴿٤٥﴾

45. Wuxuu u dhawaaqay (baryey) Nabi Nuux Allehiis wuxuuna yidhi: Allow wiilkaygu wuxuu ka mid yahay ehelkeyga yaboohaaguna waa xaq (sugan) adaana xukunkaagu falsan yahay.

قَالَ يَٰنُوحُ إِنَّهُۥ لَيۡسَ مِنۡ أَهۡلِكَۖ إِنَّهُۥ عَمَلٌ غَيۡرُ صَٰلِحٖۖ فَلَا تَسۡـَٔلۡنِ مَا لَيۡسَ لَكَ بِهِۦ عِلۡمٌۖ إِنِّيٓ أَعِظُكَ أَن تَكُونَ مِنَ ٱلۡجَٰهِلِينَ ﴿٤٦﴾

46. Alle wuxuu yidhi: Nuuxow wiilku ehelkaaga kama mid aha waana camal aan suubanayn ee hay warsan waxaadan cilmi u lahayn, waxaan kaa waanin inaad jaahiliinta ka mid noqoto.

قَالَ رَبِّ إِنِّيٓ أَعُوذُ بِكَ أَنۡ أَسۡـَٔلَكَ مَا لَيۡسَ لِي بِهِۦ عِلۡمٞۖ وَإِلَّا تَغۡفِرۡ لِي وَتَرۡحَمۡنِيٓ أَكُن مِّنَ ٱلۡخَٰسِرِينَ ﴿٤٧﴾

47. Wuxuuna yidhi Nabi Nuux: Allow waxaan kaa magan galay inaan ku warsado waxaanan u cilmi lahayn haddaadan ii dambi dhaafin oodan ii naxariisan waxaan ka mid noqon kuwa khasaaray.

قِيلَ يَٰنُوحُ ٱهۡبِطۡ بِسَلَٰمٖ مِّنَّا وَبَرَكَٰتٍ عَلَيۡكَ وَعَلَىٰٓ أُمَمٖ مِّمَّن مَّعَكَۚ وَأُمَمٞ سَنُمَتِّعُهُمۡ ثُمَّ يَمَسُّهُم مِّنَّا عَذَابٌ أَلِيمٞ ﴿٤٨﴾

48. Waxaa lagu yidhi: Nuuxow ku deg nabadgelyo iyo khayr badan oo xaggannaga ka ahaaday ayadoy dushaada tahay adiga iyo ummadaha kula jira, ummadana waannu u raaxayn markaas waxaa taaban cadaab daran oo xaggannaga ka ahaada.

تِلْكَ مِنْ أَنۢبَآءِ ٱلْغَيْبِ نُوحِيهَآ إِلَيْكَ ۖ مَا كُنتَ تَعْلَمُهَآ أَنتَ وَلَا قَوْمُكَ مِن قَبْلِ هَٰذَا ۖ فَٱصْبِرْ ۖ إِنَّ ٱلْعَٰقِبَةَ لِلْمُتَّقِينَ ﴿٤٩﴾

49. Kaasi waa warkii maqnaa oon kuu waxyoonayno, maadan ahayn mid og adi iyo qoomkaagu midna kan hortiis ee samir, cidhibta (fiican) waxaa leh kuwa dhawrsada.

Markii la halaagay wiilkii Nabi Nuux yaa waxaa qaaday naxariistii waalid wax dhalay markaasuu Ilaahay u cawday isagoo sheegi inuu wiilku ehelkiisa ka mid ahaa yabooha Alle na xaq yahay oo ahaa in ehelkiisa loo korin Alle na xukunkiisu caddaalad yahay, Allese wuxuu u sheegay inuusan wiilku ehelkiisa ka mid ahayn marba hadduusan xaqa rumeynin, wax fiicanna ma aha mana habboona in Nabi Nuux waxaasoo kale warsado sida kuwaan wax ogayn, markaasuu is gartay Nabi Nuux Allana warsaday dambi dhaaf iyo naxariis si uusan u khasaarin, waxaana la faray inuu ka dego doonta isaga iyo inta la jirta iyagoo heli nabadgalyo iyo barako Alle, arrintaasna waa waxyaalaha aan la ogaan karin haddaan Alle Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) u waxyoon, wuxuuna Alle faray Nabiga inuu adkaysto, wanaaggana waxaa ku dambayn kuwa dhawrsada ee xaqa ku socda, aayadahanna waxay muujin in qaraabadu iyo sokeeyanimadu tahay caqiidada iyo islaannimada, inaan lala mid noqon daalimiinta. **[Huud: 45-49].**

وَإِلَىٰ عَادٍ أَخَاهُمْ هُودًا ۚ قَالَ يَٰقَوْمِ ٱعْبُدُوا۟ ٱللَّهَ مَا لَكُم مِّنْ إِلَٰهٍ غَيْرُهُۥ ۖ إِنْ أَنتُمْ إِلَّا مُفْتَرُونَ ﴿٥٠﴾

50. Caadna waxaa loo diray walaalkood Nabi Huud, wuxuuna yidhi qoomkayow caabuda Alle ilaah kale idiinma sugnee waxaan been abuurasho ahaynna kuma sugnidin.

يَٰقَوْمِ لَآ أَسْـَٔلُكُمْ عَلَيْهِ أَجْرًا ۖ إِنْ أَجْرِىَ إِلَّا عَلَى ٱلَّذِى فَطَرَنِى ۚ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿٥١﴾

51. Qoomkayow idinka warsan maayo xaqa ujuuro ujuuradayda waxaan uun ka mutaa Allaha i abuuray ee miyeydaan wax kasayn.

وَيَٰقَوْمِ ٱسْتَغْفِرُوا۟ رَبَّكُمْ ثُمَّ تُوبُوٓا۟ إِلَيْهِ يُرْسِلِ ٱلسَّمَآءَ عَلَيْكُم مِّدْرَارًا وَيَزِدْكُمْ قُوَّةً إِلَىٰ قُوَّتِكُمْ وَلَا تَتَوَلَّوْا۟ مُجْرِمِينَ ﴿٥٢﴾

52. Qoomkayow dambi dhaaf warsada Allihiin una toobad keena ha soo (daayo) diro samada (roobka) korkiinna si badane hana idiinku kordhiyo xoog

xooggiinnii, hana jeedsannina idinkoo dambiilayaal ah.

Way isdaba joogtaa qisada Nabiyada iyo siduu Alle u diray iyo siday qoomkoodii u beeniyeen una dhibeen, si Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) u adkaysto una ogaado inaan dhibku kali ku ahayn, halkanna waxaa laga warramay Nabi Huud iyo siduu xaqa u tusiyay qoomkiisii una sheegay inuusan xoolo ka rabin ee abaal marintiisa uu Ilaahay uun ka sugi, farayna inay Ilaahay kaliya caabudaan, danbi dhaafna warsadaan una toobad keenaan, si Alle ugu naxariisto roob iyo barwaaqo iyo xoogna u siiyo, oyna xaqa ka jeedsan, taasina waxay ku tusin in wanaaggu sabab u noqdo barwaaqo iyo khayr, xumaantuna wadato dhibaato iyo khasaare iyo luggooyo. **[Huud: 50-52].**

قَالُواْ يَٰهُودُ مَا جِئۡتَنَا بِبَيِّنَةٖ وَمَا نَحۡنُ بِتَارِكِيٓ ءَالِهَتِنَا عَن قَوۡلِكَ وَمَا نَحۡنُ لَكَ بِمُؤۡمِنِينَ ٥٣

53. Waxay dheheen Huudow noolama aadan imaannin xujo cad kagamana tageynno ilaahyahannaga hadalkaaga kumana rumeynayno.

إِن نَّقُولُ إِلَّا ٱعۡتَرَىٰكَ بَعۡضُ ءَالِهَتِنَا بِسُوٓءٖۗ قَالَ إِنِّيٓ أُشۡهِدُ ٱللَّهَ وَٱشۡهَدُوٓاْ أَنِّي بَرِيٓءٞ مِّمَّا تُشۡرِكُونَ ٥٤

54. Wax kale kuguma dhaheeyno oon ahayn in ilaahyahannaga qaarkood kugu asiibeen xumaan (cudur), wuxuu yidhi waxaan Alle marag galin ee idinkuna marag noqda inaan bari ka ahay waxaad la wadaajinaysaan (cibaadada).

مِن دُونِهِۦۖ فَكِيدُونِي جَمِيعٗا ثُمَّ لَا تُنظِرُونِ ٥٥

55. Oo Alle ka soo hadhay ee i dhagra dhammaan hana i sugina.

إِنِّي تَوَكَّلۡتُ عَلَى ٱللَّهِ رَبِّي وَرَبِّكُمۡۚ مَّا مِن دَآبَّةٍ إِلَّا هُوَ ءَاخِذُۢ بِنَاصِيَتِهَآۚ إِنَّ رَبِّي عَلَىٰ صِرَٰطٖ مُّسۡتَقِيمٖ ٥٦

56. Anugu waxaan tala saartay Ilaahay ee ah Rabbigay iyo Rabbigiin wax socda oosan foodda qabanayn ma jiro (awoodayn) Rabbigayna wuxuu ku sugan yahay jid toosan.

Waxay dheheen: Huudow xujo cad nooma aadan keenin mana nihin kuwa uga tegi ilaahyadooda hadalkaaga kuna rumeyn maynno, waxaa uun waalli kugu asiibay ilaahyadanna qaarkood markaad ka reebtay cibaadadooda, wuxuuna ku yidhi: waxaan Alle marag galin idinkana idin marag galin inaan bari ka ahay waxaad la wadaajinaysaan Alle oo ka soo hadhay, ee bal i dhagra dhammaan hana i sugina, waxaan talasaartay Ilaahay ee Rabbigay ah iyo Rabbigiin, waxa socdoo dhanna wuxuu ku hoos jiraa awoodda Alle illeen Alle jid toosan oo xaqa yuu ku sugan yahaye. Gaaladuna had iyo jeer waxay dadka muslimiinta ah ku cabsi galiyaan waxyaalo kale oo Alle ka soo hadhay, waase in Alle si dhaba loo caabudo isaga uun laga cabsado, waxa ka soo hadhayna laga jeedsado cibaadadooda iyo wax ka dayiddooda, lana talo saartaa illeen isagaa wax walba awooddiisa ku hoos jiraaye, jidka toosan ee xaqa ah ee Alle ee islaamka ahna lagu socdaa dadkana loogu yeedho laguna maamulo. **[Huud: 53-56].**

فَإِن تَوَلَّوْا۟ فَقَدْ أَبْلَغْتُكُم مَّآ أُرْسِلْتُ بِهِۦٓ إِلَيْكُمْ ۚ وَيَسْتَخْلِفُ رَبِّى قَوْمًا غَيْرَكُمْ وَلَا تَضُرُّونَهُۥ شَيْـًٔا ۚ إِنَّ رَبِّى عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ حَفِيظٌ ﴿٥٧﴾

57. Haddaad jeedsataan waxaan idin gaadhsiiyey wixii laygu soo diray xaggiinna, wuuna idinka gadaal marin Rabbigay qoom kale waxna kama dhibaysaan, Rabbigayna wax kasta wuu ilaaliyaa.

وَلَمَّا جَآءَ أَمْرُنَا نَجَّيْنَا هُودًا وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ مَعَهُۥ بِرَحْمَةٍ مِّنَّا وَنَجَّيْنَٰهُم مِّنْ عَذَابٍ غَلِيظٍ ﴿٥٨﴾

58. Markuu yimid amarkannagii waxaan ku korinnay huud iyo intii rumaysay naxariistannada waxaanna ka korinnay cadaab adag.

وَتِلْكَ عَادٌ ۖ جَحَدُوا۟ بِـَٔايَٰتِ رَبِّهِمْ وَعَصَوْا۟ رُسُلَهُۥ وَٱتَّبَعُوٓا۟ أَمْرَ كُلِّ جَبَّارٍ عَنِيدٍ ﴿٥٩﴾

59. Taasi waa caad, waxay diideen aayaadkii Rabbigood, waxayna caasiyeen rasuulladiisii waxayna raaceen amarka islaweyne madax adag dhammaantiis.

وَأُتْبِعُوا۟ فِى هَٰذِهِ ٱلدُّنْيَا لَعْنَةً وَيَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ ۗ أَلَآ إِنَّ عَادًا كَفَرُوا۟ رَبَّهُمْ ۗ أَلَا بُعْدًا لِّعَادٍ قَوْمِ هُودٍ ﴿٦٠﴾

60. Waxaana la raaciyey adduunyadan lacnad iyo maalinta qiyaamaba, caad way ka gaaloobeen Rabbigood, fogaansha (halaag) baana u sugnaaday caadkii qoomkii huud ahaa.

Nabi Huud wuxuu ku yidhi haddaad cibaadada Alle kaliya ka jeedsataan diiddaanna anigu waan idin gaadhsiiyey xaqii laygu diray, Alle na cid kaluu idinku beddeli waxna kama dhimaysaan, illeen wax walba Alle ayaa daalacane, markaasaa la halaagay illeen way kibreene oo xaqii ka jeedsadeene waana sidaas had iyo jeer, wuxuuna Alle koriyey huud iyo intii la jirtay ee xaqa rumeysay, waxaana naxariis Alle darteed looga koriyey cadaab adag, wanataas reer caad markay beeniyeen aayaadkii Rabbigood caasiyeenna rasuulladiisii raaceenna amarka mid kastoo kibir badan oo isla weyn.

Adduunyadana waa la lacnaday, qiyaamadana waa lagu lacnadi, reer Caadna waxaa ogaysiis ah inay ka gaaloobeen Rabbigood, waxaana naxariis laga dheereeyey caadkii qoomkii Nabi Huud ahaa, waddadooda ciddii martana waa la mid iyo ka xun. **[Huud: 57-60].**

* وَإِلَىٰ ثَمُودَ أَخَاهُمْ صَٰلِحًا ۚ قَالَ يَٰقَوْمِ ٱعْبُدُوا۟ ٱللَّهَ مَا لَكُم مِّنْ إِلَٰهٍ غَيْرُهُۥ ۖ هُوَ أَنشَأَكُم مِّنَ ٱلْأَرْضِ وَٱسْتَعْمَرَكُمْ فِيهَا فَٱسْتَغْفِرُوهُ ثُمَّ تُوبُوٓا۟ إِلَيْهِ ۚ إِنَّ رَبِّى قَرِيبٌ مُّجِيبٌ ﴿٦١﴾

61. Thamuudna waxaan u dirray walaalkeed (Nabi) Saalax, wuxuuna yidhi qoomkayow caabuda Alle, macbuud xaqa oo ka soo hadhay ma idiin sugnee, isagaana idiinka ahaysiiyey dhulka idinkuna cammiray dhexdeeda ee dambidhaaf warsada una toobad keena illeen Rabbigay waa dhawyahay oo ajiibaa (baryadee).

قَالُوا۟ يَٰصَٰلِحُ قَدْ كُنتَ فِينَا مَرْجُوًّا قَبْلَ هَٰذَآ ۖ أَتَنْهَىٰنَآ أَن نَّعْبُدَ مَا يَعْبُدُ ءَابَآؤُنَا ۖ وَإِنَّنَا لَفِى شَكٍّ مِّمَّا تَدْعُونَآ إِلَيْهِ مُرِيبٍ ﴿٦٢﴾

62. Waxay dheheen Saalaxow waxaad ku ahayd dhexdannada mid la rajeeyo arrintan ka hor ma waxaad naga reebi inaan caabudno waxay caabudayeen aabayaalkanno annagu shaki daran baan kaga sugannahay waxaad noogu yeedhi.

قَالَ يَٰقَوْمِ أَرَءَيْتُمْ إِن كُنتُ عَلَىٰ بَيِّنَةٍ مِّن رَّبِّى وَءَاتَىٰنِى مِنْهُ رَحْمَةً فَمَن يَنصُرُنِى مِنَ ٱللَّهِ إِنْ عَصَيْتُهُۥ ۖ فَمَا تَزِيدُونَنِى غَيْرَ تَخْسِيرٍ ﴿٦٣﴾

63. Wuxuu yidhi bal ka warrama haddaan xujo xagga Rabbigay ku sugnahay oo uu i siiyey naxariis xaggiisa ah yaa iiga gargaari Alle haddaan caasiyo iimana kordhinaysaan waxaan khasaare ahayn.

Qisada reer Thamuud wax badan yuu quraanku sheegay wixii dhexmaray Nabi Saalax, halkanse waxay sheegeen inay u han waynaayeen Nabi Saalax intuusan ka reebin cibaadada waxay aabbayaalkood caabudi jireen oo baadil ah, waxayna sheegeen inay ka shakisan yihiin wuxuu ugu yeedhi, wuxuuse ugu jawaabay inuu xaq iyo xujo Ilaah oo cad ku sugan yahay, warkooduna waxaan khasaare ahayn u kordhinayn hadduu maqlo, waana kaas xaqa iyo baadilku say u kala muuqdaan. **[Huud: 61-63].**

وَيَٰقَوۡمِ هَٰذِهِۦ نَاقَةُ ٱللَّهِ لَكُمۡ ءَايَةٗۖ فَذَرُوهَا تَأۡكُلۡ فِيٓ أَرۡضِ ٱللَّهِۖ وَلَا تَمَسُّوهَا بِسُوٓءٖ فَيَأۡخُذَكُمۡ عَذَابٞ قَرِيبٞ ٦٤

64. Qoomkayow tan waa hashii Alle, calaamad bayna idiin tahay ee iska daaya ha cunto dhulka Alle hana ku taabannina xumaan oo markaas idin qabto cadaab dhaw.

فَعَقَرُوهَا فَقَالَ تَمَتَّعُواْ فِي دَارِكُمۡ ثَلَٰثَةَ أَيَّامٖۖ ذَٰلِكَ وَعۡدٌ غَيۡرُ مَكۡذُوبٖ ٦٥

65. Wayse dileen hashii, wuxuuna ku yidhi ku raaxaysta guryihiinna saddex maalmood kaasina waa yabooh aan la beeninayn.

فَلَمَّا جَآءَ أَمۡرُنَا نَجَّيۡنَا صَٰلِحٗا وَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ مَعَهُۥ بِرَحۡمَةٖ مِّنَّا وَمِنۡ خِزۡيِ يَوۡمِئِذٍۚ إِنَّ رَبَّكَ هُوَ ٱلۡقَوِيُّ ٱلۡعَزِيزُ ٦٦

66. Markuu u yimid amarkii Alle waxaan ku korinnay Nabi Saalax iyo intii rumaysay naxariistannada iyo inaan (ka korinnay) dulliga maalintaas, Alle na waa xoog badane adkaada.

وَأَخَذَ ٱلَّذِينَ ظَلَمُواْ ٱلصَّيۡحَةُ فَأَصۡبَحُواْ فِي دِيَٰرِهِمۡ جَٰثِمِينَ ٦٧

67. Waxaana qabatay kuwii dulmi falay qaylo waxayna ahaadeen kuwo guryahooda ku dhex dhinta.

كَأَن لَّمۡ يَغۡنَوۡاْ فِيهَآۗ أَلَآ إِنَّ ثَمُودَاْ كَفَرُواْ رَبَّهُمۡۗ أَلَا بُعۡدٗا لِّثَمُودَ ٦٨

68. Sidii iyagoon ku dhex nagaannin, Thamuud waxay ka gaaloobeen Rabbigood waxayna muteen fogaansho (halaag).

Sidoo kale Saalax wuxuu u sheegay inay tanu tahay hashii Alle mucjisana tahay ee ay iska daayaan ha daaqdo dhulka Alle e, xumaanna ayan ku taaban

si aan loo ciqaabin, wayse dileen waana la halaagay, waxaana nabad galay Nabi Saalax iyo intii rumeysay, waxaana laga koriyey dulligii maalintaas, illeen Alle waa xoog badane, waxaana ku dhacday gaaladii qaylo oy bakhtiyeen, waxaadna mooddaa guryahoodii inaan la degin, reer Thamuudna waxay ka gaaloobeen Rabbigood waxaana laga dheereeyey naxariista Alle ee waasaca ah, waana wax ciddii caqli leh ku waano qaadan, markaas xaqa uun ku toosi si ay u liibaanto labada daaroodba. **[Huud: 64-68].**

وَلَقَدْ جَآءَتْ رُسُلُنَآ إِبْرَٰهِيمَ بِٱلْبُشْرَىٰ قَالُوا۟ سَلَٰمًا ۖ قَالَ سَلَٰمٌ ۖ فَمَا لَبِثَ أَن جَآءَ بِعِجْلٍ حَنِيذٍ ﴿٦٩﴾

69. Waxay ula yimaaddeen malaa'igtannadii aan soo dirray Nabi Ibraahim bishaaro, waxayna dheheen: salaamo korkaaga ha ahaato, isna wuxuu yidhi: salaam, kamana nagaan (daahin) inuu u keeno dibi la dubay (hilibkiis).

فَلَمَّا رَءَآ أَيْدِيَهُمْ لَا تَصِلُ إِلَيْهِ نَكِرَهُمْ وَأَوْجَسَ مِنْهُمْ خِيفَةً ۚ قَالُوا۟ لَا تَخَفْ إِنَّآ أُرْسِلْنَآ إِلَىٰ قَوْمِ لُوطٍ ﴿٧٠﴾

70. Markuu arkay in ayna gacmahoodu gaadhayn wuu la yaabay wuxuuna iska kasay cabsi xaggooda ah, waxayna dheheen ha cabsan waxaa naloo soo diray qoomka (Nabi) Luude.

وَٱمْرَأَتُهُۥ قَآئِمَةٌ فَضَحِكَتْ فَبَشَّرْنَٰهَا بِإِسْحَٰقَ وَمِن وَرَآءِ إِسْحَٰقَ يَعْقُوبَ ﴿٧١﴾

71. Haweeneydiisiina way taagnayd wayna qososhay waxaanna ugu bishaaraynay (Nabi) Isxaaq, gadaashiina Yacquub (wiilkiisii).

قَالَتْ يَٰوَيْلَتَىٰٓ ءَأَلِدُ وَأَنَا۠ عَجُوزٌ وَهَٰذَا بَعْلِى شَيْخًا ۖ إِنَّ هَٰذَا لَشَىْءٌ عَجِيبٌ ﴿٧٢﴾

72. Waxayna tidhi waa la yaabe miyaan dhali anoo cajuuso ah ninkaygana oday yahay arrintaasu waa wax la yaab leh.

قَالُوٓا۟ أَتَعْجَبِينَ مِنْ أَمْرِ ٱللَّهِ ۖ رَحْمَتُ ٱللَّهِ وَبَرَكَٰتُهُۥ عَلَيْكُمْ أَهْلَ ٱلْبَيْتِ ۚ إِنَّهُۥ حَمِيدٌ مَّجِيدٌ ﴿٧٣﴾

73. Waxay dheheen: ma waxaad la yaabi amarka Alle. Naxariistiisa iyo barakadiisa korkiinna ha ahaato, qoyskanow, Alle na waa la mahdiye la sharrifo.

Nabi Ibraahim malaa'igtii way u bishaaraysay, wayna salaameen isna wuu ka celiyey oo soo dhaweeyey oo u darbay martiqaad, wuxuuna u qalay dibi, mase ayan cunin illeen waa malaa'ige, markaasuu shakiyey oo ka cabsaday, waxayse ku dheheen ha cabsan waxaa naloo soo diray qoomka Nabi Luude, haweeneydiisiina way agtaagnayd ooy qososhay, waxaana loogu bishaareeyey Isxaaq oo Yacquubna dhali oos ka dambeyn, markay haweeneydii la yaabtay waxaa loogu jawaabay ma waxaad la yaabi amarka Alle. Ha ahaato naxariistiisa iyo barakadiisa korkiinna dadka gurigan, wax lala yaabo ma aha illeen Alle waa ammaanle sharaf leh, taasina waxay ku tusin isu bishaaraynta, in dadka la xasiliyo, cabsida caadiga ah oo jirta, waynida awoodda Alle, naxariistiisa iyo barakadiisa aan la koobi karin. **[Huud: 69-73].**

فَلَمَّا ذَهَبَ عَنْ إِبْرَٰهِيمَ ٱلرَّوْعُ وَجَآءَتْهُ ٱلْبُشْرَىٰ يُجَٰدِلُنَا فِى قَوْمِ لُوطٍ ﴿٧٤﴾

74. Markay Nabi Ibraahim ka tagtay cabsidii (argagaxii) una timid bishaaradii yuu noqday mid nagula dooda xaalka qoomka (Nabi Luud).

إِنَّ إِبْرَٰهِيمَ لَحَلِيمٌ أَوَّٰهٌ مُّنِيبٌ ﴿٧٥﴾

75. Nabi Ibraahimna waa dulsame noqosho iyo toobadkeen badan.

يَٰٓإِبْرَٰهِيمُ أَعْرِضْ عَنْ هَٰذَآ ۖ إِنَّهُۥ قَدْ جَآءَ أَمْرُ رَبِّكَ ۖ وَإِنَّهُمْ ءَاتِيهِمْ عَذَابٌ غَيْرُ مَرْدُودٍ ﴿٧٦﴾

76. Ibraahimow iskaga jeedso xaalkan, waxaa dhab u yimid amarkii Rabbigaaye, iyagana waxaa u imaan cadaab aan laga celinayne.

وَلَمَّا جَآءَتْ رُسُلُنَا لُوطًا سِىٓءَ بِهِمْ وَضَاقَ بِهِمْ ذَرْعًا وَقَالَ هَٰذَا يَوْمٌ عَصِيبٌ ﴿٧٧﴾

77. Markay malaa'igtaan soo dirnay u timid Nabi Luud wuu ka walbahaaray wuuna la cidhiidhyamay wuxuuna yidhi tani waa maalin daran.

وَجَآءَهُۥ قَوْمُهُۥ يُهْرَعُونَ إِلَيْهِ وَمِن قَبْلُ كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ٱلسَّيِّـَٔاتِ ۚ قَالَ يَٰقَوْمِ هَٰٓؤُلَآءِ بَنَاتِى هُنَّ أَطْهَرُ لَكُمْ ۖ فَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَلَا تُخْزُونِ فِى ضَيْفِىٓ ۖ أَلَيْسَ مِنكُمْ رَجُلٌ رَّشِيدٌ ﴿٧٨﴾

78. Waxaana yimid qoomkiisii oo u deg degi xaggiisa horayna waxay u ahaayeen kuwo fala xumaan, wuxuuna yidhi qoomkayow kuwaasu waa gabdhahaygii iyagaa idiin dhahiran ee ka dhawrsada Alle hana igu dullaynina martidayda, miyuusan nin rashiida «fiican» idinku jirin.

79. Waxay dheheen waad ogtahay inaannan ku lahayn gabdhahaaga xaq, waadna ogtahay waxaannu dooni.

قَالُواْ لَقَدۡ عَلِمۡتَ مَا لَنَا فِي بَنَاتِكَ مِنۡ حَقّٖ وَإِنَّكَ لَتَعۡلَمُ مَا نُرِيدُ ٧٩

Markay cabsidii ka ba'day Nabi Ibraahim yuu galay inuu ka doodo qoomka Luud illeen Nabi Ibraahim wuxuu ahaa toobad keen badane dulsan, waxayse malaa'igtii ku tidhi isaga jeedso Ibraahiimow xaalkan amarkii Alle ayaa yimide, waxaana u imaan cadaab aan la celinayne, markay u yimaadeen Nabi Luudna wuu walbahaaray oo cidhiidhyamay isagoo yidhi maanta waa maalin daran, waxaana yimid qoomkiisii oo ordi, horayna waxay u fali jireen xumaanta, wuxuuna ku yidhi: kuwaas waa gabdhahaygii ee guursada iyagaa nadiif idiin ehe, Alle na ka cabsada hana igu dullaynina martidayda miyuusan nin rashiida idinku jirin, waxayse sheegeen inayan dan ka lahayn gabdhihiisa uu garanna waxay dooni, waa layaab kala fiicanaa hadal muslim Alle rumeeyey iyo gaal Alle ka fogaaday oo xumaanta qasan, maxaase u dambeeyey, waa halaag. **[Huud: 74-79].**

80. Wuxuu yidhi Nabi Luud: haddaan xoog idiin leeyahay ama u dunmi tiir adag (waan idin ciqaabi lahaa).

قَالَ لَوۡ أَنَّ لِي بِكُمۡ قُوَّةً أَوۡ ءَاوِيٓ إِلَىٰ رُكۡنٖ شَدِيدٖ ٨٠

81. Waxay dheheen (malaa'igtii) Luudow waxaan nahay farriintii Allehaa dhibna kuma gaadhsiinayaan ee guuri ehelkaaga qayb habeenka ka mida, dibna hasoo dayina, haweeyneydaada mooyee, waxaa ku dhici waxa ku dhacaya, ballankooduna waa subaxa, miyuusan subuxu dhawayn.

قَالُواْ يَٰلُوطُ إِنَّا رُسُلُ رَبِّكَ لَن يَصِلُوٓاْ إِلَيۡكَۖ فَأَسۡرِ بِأَهۡلِكَ بِقِطۡعٖ مِّنَ ٱلَّيۡلِ وَلَا يَلۡتَفِتۡ مِنكُمۡ أَحَدٌ إِلَّا ٱمۡرَأَتَكَۖ إِنَّهُۥ مُصِيبُهَا مَآ أَصَابَهُمۡۚ إِنَّ مَوۡعِدَهُمُ ٱلصُّبۡحُۚ أَلَيۡسَ ٱلصُّبۡحُ بِقَرِيبٖ ٨١

82. Markuu yimid amarkannagii waxaan ka yeellay korkeedii hoosteedii, waxaana ku daadinnay dhagaxyo la shiday oo israac raacsan.

فَلَمَّا جَآءَ أَمۡرُنَا جَعَلۡنَا عَٰلِيَهَا سَافِلَهَا وَأَمۡطَرۡنَا عَلَيۡهَا حِجَارَةٗ مِّن سِجِّيلٖ مَّنضُودٖ ٨٢

مُّسَوَّمَةً عِندَ رَبِّكَ ۖ وَمَا هِيَ مِنَ ٱلظَّٰلِمِينَ بِبَعِيدٍ ﴿٨٣﴾

83. Lagu calaameeyey Allehaa agtiisa, wax daalimiinta ka fogna ma aha.

Wuxuu ku calaacalay Nabi Luud in hadduu awood leeyahay ama ku tiirsan yahay tiir adag uu ciqaabi lahaa gaaladaas, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Alle ha u naxariistee Nabi Luud wuxuu ahaa mid ku tiirsan tiir adag (Allihiis), malaa'igtii waxay u sheegeen in Alle soo diray uusan cabsanna, wax dhibana uusan gaadhayn, guuriyana ehelkiisa iyagoon dib soo eegayn, haweeneydiisa oo la halaagi mooyee, waxaana la halaagi subaxdii oon fogayn, amarkii Alle ayaana u yimid oo waa la dabagaddiyay laguna soo daadiyey dhagax naara oo calaamaysan, arrintaasuna kama foga daalim oo dhan, waxaana loo baahan yahay in lagu waano qaato, wanaaggana lagu dadaalo, xumaantana laga dheeraado. **[Huud: 80-83].**

* وَإِلَىٰ مَدْيَنَ أَخَاهُمْ شُعَيْبًا ۚ قَالَ يَٰقَوْمِ ٱعْبُدُوا۟ ٱللَّهَ مَا لَكُم مِّنْ إِلَٰهٍ غَيْرُهُۥ ۖ وَلَا تَنقُصُوا۟ ٱلْمِكْيَالَ وَٱلْمِيزَانَ ۖ إِنِّىٓ أَرَىٰكُم بِخَيْرٍ وَإِنِّىٓ أَخَافُ عَلَيْكُمْ عَذَابَ يَوْمٍ مُّحِيطٍ ﴿٨٤﴾

84. Madyanna waxaan u dirnay walaalkood (Nabi) Shucayb, wuxuuna yidhi: qoomkayow caabuda Alle idiinma sugna ilaah kalee, hana nusqaaminnina beegidda (miisidda) iyo miisaanka waxaan idinku arkaa khayre (xoolo), waxaana idiinka cabsan cadaab maalin koobi.

وَيَٰقَوْمِ أَوْفُوا۟ ٱلْمِكْيَالَ وَٱلْمِيزَانَ بِٱلْقِسْطِ ۖ وَلَا تَبْخَسُوا۟ ٱلنَّاسَ أَشْيَآءَهُمْ وَلَا تَعْثَوْا۟ فِى ٱلْأَرْضِ مُفْسِدِينَ ﴿٨٥﴾

85. Qoomkayow oofiya miisidda iyo miisaanka si caddalada hana ka nusqaaminnina dadka waxooda dhulkana ha fasaadinnina.

بَقِيَّتُ ٱللَّهِ خَيْرٌ لَّكُمْ إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ۚ وَمَآ أَنَا۠ عَلَيْكُم بِحَفِيظٍ ﴿٨٦﴾

86. Baaqiga Alle yaa idiin khayr roone, ma ihi mid idin ilaalin (karee).

قَالُوا۟ يَٰشُعَيْبُ أَصَلَوٰتُكَ تَأْمُرُكَ أَن نَّتْرُكَ مَا يَعْبُدُ ءَابَآؤُنَآ أَوْ أَن نَّفْعَلَ فِىٓ أَمْوَٰلِنَا مَا نَشَٰٓؤُا۟ ۖ إِنَّكَ لَأَنتَ ٱلْحَلِيمُ ٱلرَّشِيدُ ﴿٨٧﴾

87. Waxay dheheen Shucaybow ma salaadahaagaa ku fari inaan ka tagno waxay caabudayeen aabbayaalkaanno ama ku fallo xoolahannaga waxaan doonno, adugu waxaad uun

tahay dulbadane toosan (jees jees dartiis).

Qoomkii Madyanna waxaa loo diray Nabi Shucayb waana meel ku taalla xijaas iyo Shaam dhexdooda oo u dhaw magaalada Macaan, wuxuuna faray in ay Alle kaliya caabudaan miisidda iyo miisaankana si caddaalada u dhammaystiraan khayrka Alle iyo baaqiga wanaagsanna shifaystaan dhulkana aanay fasaadinnin dadkana waxooda ka nusqaaminnin si uusan u dhicin cadaab daran oo kooba, wayse ku jees jeeseen oy ku dheheen ma salaaddaadaa ku fari inaan ka tagno waxay aabayaalkanno caabudi jireen ama say doonaan u maamulaan xoolahooda, waxayna dheheen waxaad tahay nin aad u fiican iyagoo ku jees jeesi, waana xaal kala fog wanaagguu faray iyo xummantay ugu jawaabeen, illeen waa gaalee iyo caadadeede. **[Huud: 84-87].**

قَالَ يَٰقَوۡمِ أَرَءَيۡتُمۡ إِن كُنتُ عَلَىٰ بَيِّنَةٖ مِّن رَّبِّي وَرَزَقَنِي مِنۡهُ رِزۡقٗا حَسَنٗاۚ وَمَآ أُرِيدُ أَنۡ أُخَالِفَكُمۡ إِلَىٰ مَآ أَنۡهَىٰكُمۡ عَنۡهُۚ إِنۡ أُرِيدُ إِلَّا ٱلۡإِصۡلَٰحَ مَا ٱسۡتَطَعۡتُۚ وَمَا تَوۡفِيقِيٓ إِلَّا بِٱللَّهِۚ عَلَيۡهِ تَوَكَّلۡتُ وَإِلَيۡهِ أُنِيبُ ٨٨

88. Wuxuu yidhi: qoomkayow bal ka warrama haddaan ku sugnahay xujo xagga Rabbigey iguna arsuqay risqi wanaagsan, oonan doonaynna inaan idiin dabo maro waxaan idinka reebi oonan doonayn waxaan wanaajin ahayn, intaan karo, waafajintaydana waxaan Alle ahayn ma karo isagaana talo saartay xaggiisaana u noqon, (toobad).

وَيَٰقَوۡمِ لَا يَجۡرِمَنَّكُمۡ شِقَاقِيٓ أَن يُصِيبَكُم مِّثۡلُ مَآ أَصَابَ قَوۡمَ نُوحٍ أَوۡ قَوۡمَ هُودٍ أَوۡ قَوۡمَ صَٰلِحٖۚ وَمَا قَوۡمُ لُوطٖ مِّنكُم بِبَعِيدٖ ٨٩

89. Qoomkayow yuusan idinku xambaarin khilaafkaygu inuu idinku dhaco wixii ku dhacay qoomkii (Nabi) Nuux ama qoomkii Nabi Huud ama (Nabi) Saalax idinkamana foga (waqtigii iyo meeshii lagu halaagay) qoomkii (Nabi) Luud.

وَٱسۡتَغۡفِرُواْ رَبَّكُمۡ ثُمَّ تُوبُوٓاْ إِلَيۡهِۚ إِنَّ رَبِّي رَحِيمٞ وَدُودٞ ٩٠

90. Ee dambi dhaaf warsada Allihiin una toobadkeena illeen Rabbigey waa naxariiste jecel (ciddii toobad keentee).

قَالُواْ يَٰشُعَيۡبُ مَا نَفۡقَهُ كَثِيرٗا مِّمَّا تَقُولُ وَإِنَّا لَنَرَىٰكَ فِينَا ضَعِيفٗاۖ وَلَوۡلَا رَهۡطُكَ لَرَجَمۡنَٰكَۖ وَمَآ أَنتَ عَلَيۡنَا بِعَزِيزٖ ٩١

91. Waxay dheheen Shucaybow ma kasaynno wax badan ood sheegi, waxaana kugu aragnaa inaad dhexdannada ku tabar yar tahay, hadduusan qoomkaagu jirin waan ku dhagaxyeyn lahayn, mana tihid adugu mid cisi nagu leh.

قَالَ يَٰقَوۡمِ أَرَهۡطِيٓ أَعَزُّ عَلَيۡكُم مِّنَ ٱللَّهِ وَٱتَّخَذۡتُمُوهُ وَرَآءَكُمۡ ظِهۡرِيًّاۖ إِنَّ رَبِّي بِمَا تَعۡمَلُونَ مُحِيطٞ ٩٢

92. Wuxuu yidhi: qoomkayow ma jamaacadaydaa idin kala wayn Alle ood ka yeelateen waxaad dhabarkiinna ka tuurtaan (xaqa), Rabbigayna waxaad falaysaan wuu koobay.

Nabi Shucayb wuxuu ku sugnaa xaq, Alle na wuxuu siiyey Nabinnimo iyo risqi fiican, mana u daba marayn xumaantuu ka reebi sida dadka qaarkiis ee liita falaan, waxaan wanaajin ahaynna ma rabin, Alle ayuuna talasaaranayey, wuxuuna uga digay in khilaafkoodu u sababo halaaggii ku dhacay ummadihii ka horreeyey oo kale, oyna ku habboon tahay inay Alle u noqdaan, illeen waa naxariiste khayr jecele, wayse diideen oy sheegeen inayan kasayn wax badan oos sheegi, tabar yarina ay ku arkaan, haddayna ixtiraamayn qoomkiisana ay dhagax la dhici lahaayeen, wuxuuna la yaabay in qoomkiisu kala waynaado Alle iyo xaqa, oyna ka jeedsadeen isagoo Alle koobay waxay fali. Wanaaggana waa in dadka la faro aadna adugu fartoonto eedan xumaantii u dabo marin taasi waa ceebe, sidoo kale isla waynida iyo in qabiil iyo qoom ka waynaado xaqa waa wax la yaab leh. **[Huud: 88-92].**

وَيَٰقَوۡمِ ٱعۡمَلُواْ عَلَىٰ مَكَانَتِكُمۡ إِنِّي عَٰمِلٞۖ سَوۡفَ تَعۡلَمُونَ مَن يَأۡتِيهِ عَذَابٞ يُخۡزِيهِ وَمَنۡ هُوَ كَٰذِبٞۖ وَٱرۡتَقِبُوٓاْ إِنِّي مَعَكُمۡ رَقِيبٞ ٩٣

93. Wuxuu yidhi: qoomkayow ku camal fala dariiqadiinna anna waan camal fali waxaadna ogaan doontaan cidduu u yimaaddo cadaab dulleeya iyo cidda beenaalaha ah ee suga anna waan idinla sugiye.

وَلَمَّا جَآءَ أَمۡرُنَا نَجَّيۡنَا شُعَيۡبٗا وَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ مَعَهُۥ بِرَحۡمَةٖ مِّنَّا وَأَخَذَتِ

94. Markuu yimid amarkannagii waxaan ku korinnay Shucayb iyo kuwii rumeeyey

naxariistannada, waxaana qabatay kuwii dulmi falay qaylo waxayna ahaadeen kuwo guryahoodii ku dhintay.

وَأَخَذَ ٱلَّذِينَ ظَلَمُواْ ٱلصَّيۡحَةُ فَأَصۡبَحُواْ فِي دِيَٰرِهِمۡ جَٰثِمِينَ ٩٤

95. Sidii iyagoon ku nagaannin, fogaansho (halaag) baa u sugnaaday Madyan siday u fogaatay Thamuud (u halaagsantay).

كَأَن لَّمۡ يَغۡنَوۡاْ فِيهَآۗ أَلَا بُعۡدٗا لِّمَدۡيَنَ كَمَا بَعِدَتۡ ثَمُودُ ٩٥

Ugu dambayn markuu Nabi Shucayb ka quustay xaalkoodii wuxuu ugu gooddiyey in cid walba say rabto ku socoto waxaa la ogaan doonaa cidduu cadaab dulleeya u yimaaddo oo beenaala ah, saasna la wada sugo, waxaana la halaagay gaaladii islawaynayd ee madaxa adkayd, wuxuuna Alle koriyey Nabi Shucayb iyo intii rumeysay, saasayna reer Madyan halaag iyo ciqaab ugu dhacday, waana abaalka xaq diidayaasha wanaagga neceb xumahana jecel, waana arrin u baahan ku waano qaadasho iyo ka digtooni qallooc. **[Huud: 93-95].**

96. Waxaannu dhab ula dirray Nabi Muuse aayaadkannagii iyo xujo cad.

وَلَقَدۡ أَرۡسَلۡنَا مُوسَىٰ بِـَٔايَٰتِنَا وَسُلۡطَٰنٖ مُّبِينٍ ٩٦

97. Xagga Fircoon yaana u dirray iyo qoomkiisii, waxayna raaceen amarkii Fircoon, amarka Fircoonna ma ahayn mid toosan (hanuunsan).

إِلَىٰ فِرۡعَوۡنَ وَمَلَإِيْهِۦ فَٱتَّبَعُوٓاْ أَمۡرَ فِرۡعَوۡنَۖ وَمَآ أَمۡرُ فِرۡعَوۡنَ بِرَشِيدٖ ٩٧

98. Wuxuu hor qaadi qoomkiisa maalinta qiyaame, wuxuuna ku aroorin naarta, meel lagu aroorana naar baa u xun.

يَقۡدُمُ قَوۡمَهُۥ يَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِ فَأَوۡرَدَهُمُ ٱلنَّارَۖ وَبِئۡسَ ٱلۡوِرۡدُ ٱلۡمَوۡرُودُ ٩٨

99. Waxaana la raacsiiyey adduunyada lacnad iyo maalinta qiyaamaba, wax laysu kordhiyana waxaa u xun (arrintaa).

وَأُتۡبِعُواْ فِي هَٰذِهِۦ لَعۡنَةٗ وَيَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِۚ بِئۡسَ ٱلرِّفۡدُ ٱلۡمَرۡفُودُ ٩٩

ذَٰلِكَ مِنْ أَنۢبَآءِ ٱلْقُرَىٰ نَقُصُّهُۥ عَلَيْكَ ۖ مِنْهَا قَآئِمٌ وَحَصِيدٌ ﴿١٠٠﴾

100. Arrintaasu waa warkii magaalooyinka waana kaaga qisoonaynaa, waxaana ka mida kuwo taagan iyo kuwo la halaagay.

وَمَا ظَلَمْنَٰهُمْ وَلَٰكِن ظَلَمُوٓا۟ أَنفُسَهُمْ ۖ فَمَآ أَغْنَتْ عَنْهُمْ ءَالِهَتُهُمُ ٱلَّتِى يَدْعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ مِن شَىْءٍ لَّمَّا جَآءَ أَمْرُ رَبِّكَ ۖ وَمَا زَادُوهُمْ غَيْرَ تَتْبِيبٍ ﴿١٠١﴾

101. Maannaan dulmiyin iyagaase dulmiyey naftooda waxna ugama tarin ilaahyahoodii ay caabudayeen Alle ka sokow markuu u yimid amarkii Allehaa waxaan khasaare ahaynna uma kordhin.

Aayadahanna wuxuu Alle ku sheegay qisadii Nabi Muuse iyo cadowgii diinta ee ahaa Fircoon iyo colkiisii iyo in Fircoon ku socday baadi halaag iyo naarna uu u hogaamin qiyaamada qoomkiisii meel xunna uu ku aroorin, lacnadna la raaciyey aduunyada iyo qiyaamadaba, kaasina waa warkii ummaadihii hore, waxaana jira wax raad leh iyo wax la tir tiray Alle na ma dulmiyin iyagaa isdulmiyey, wixii Alle ka soo hadhay oy caabudayeenna waxba uma tarin markay ciqaabtii u timid waxaan khasaare ahayna uma kordhin, taasina waxay ku tusin in ciddii ku hoggaamisa dadka xumaan adduunyada uu qiyaamada naarta iyo ciqaabta u hoggaamin, waana wax laga digtoonaado oo laga fogaado. **[Huud: 96-101].**

وَكَذَٰلِكَ أَخْذُ رَبِّكَ إِذَآ أَخَذَ ٱلْقُرَىٰ وَهِىَ ظَٰلِمَةٌ ۚ إِنَّ أَخْذَهُۥٓ أَلِيمٌ شَدِيدٌ ﴿١٠٢﴾

102. Waana sidaas qabashada Allehaa markuu doono inuu qabto oo ciqaabo magaalo (dadkeed) oo dulmi fashay, qabashadiisuna way xanuun leedahay oy daran tahay.

إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَةً لِّمَنْ خَافَ عَذَابَ ٱلْءَاخِرَةِ ۚ ذَٰلِكَ يَوْمٌ مَّجْمُوعٌ لَّهُ ٱلنَّاسُ وَذَٰلِكَ يَوْمٌ مَّشْهُودٌ ﴿١٠٣﴾

103. Arrintaasna calaamad baa ugu sugan ciddii ka cabsan cadaabka aakhiro waana maalin loo kulmin dadka dartiis, waana maalin la soo joogsan.

وَمَا نُؤَخِّرُهُۥٓ إِلَّا لِأَجَلٍ مَّعْدُودٍ ﴿١٠٤﴾

104. Dibna uguma dhigaynno muddo magacaaban darteed mooyee.

105. Maalintuu qiyaamuhu yimaaddo ma hadasho nafi idinka Alle mooyee, waxaana ka mida dadka kuwo xun (khasaaray) iyo kuwo liibaanay.

يَوْمَ يَأْتِ لَا تَكَلَّمُ نَفْسٌ إِلَّا بِإِذْنِهِۦ ۚ فَمِنْهُمْ شَقِىٌّ وَسَعِيدٌ ﴿١٠٥﴾

106. Kuwa xumaadayna naar bay gali dhexdeedayna ku hiinraagi kuna qaylyi.

فَأَمَّا ٱلَّذِينَ شَقُوا۟ فَفِى ٱلنَّارِ لَهُمْ فِيهَا زَفِيرٌ وَشَهِيقٌ ﴿١٠٦﴾

107. Iyagoo ku waari inta samooyinku jiraan iyo dhulku wuxuu Alle doono mooyee, Rabbigaana wuxuu doonuu falaa.

خَٰلِدِينَ فِيهَا مَا دَامَتِ ٱلسَّمَٰوَٰتُ وَٱلْأَرْضُ إِلَّا مَا شَآءَ رَبُّكَ ۚ إِنَّ رَبَّكَ فَعَّالٌ لِّمَا يُرِيدُ ﴿١٠٧﴾

108. Kuwa la liibaanayna jannay ku waari inta samooyinku jiraan iyo dhulku wuxuu Alle doono mooyee, waana siismo aan go'ayn.

* وَأَمَّا ٱلَّذِينَ سُعِدُوا۟ فَفِى ٱلْجَنَّةِ خَٰلِدِينَ فِيهَا مَا دَامَتِ ٱلسَّمَٰوَٰتُ وَٱلْأَرْضُ إِلَّا مَا شَآءَ رَبُّكَ ۖ عَطَآءً غَيْرَ مَجْذُوذٍ ﴿١٠٨﴾

Dulmi ciddiisuu la hadhaa, Alle na wuu sugaa daalimka markuu qabtana ma bixiyo siduu nibigu yidhi, dulmiguna waa waxyaalaha Alle soo dedejiyo ciqaabteeda inkastoo dadku dherersado mararka qaarkood illeen waqtigaa ku kala duwan Alle agtiisa iyo dadkee, saas darteed waa in dulmiga laga fogaado, illeen waxaa dambeeya cadaabkii aakhiro iyo qiyaamo la soo kulmin, cid Alle idmo mooyee cid hadlina ayan jirin, dadkuna laba nooc noqon mid khasaaray iyo mid liibaanay, labo jidna ay kala qaadi naar iyo janno, markii naarta laga soo bixiyo ciddii ashahaado ku dhimatay yaa malakulmood dhiman markaasaa la dhahaa ehelu jannow waad waaraysaan dhimanna maysaan, ehelu naarow waad waaraysaan dhimanna maysaan, halkaasaana lagu kala tegi oyna kala caddaan ciddii faras saarrayd iyo ciddii dameer saarrayd markuu boodhku faydmo, waana dhab sugan. Soo reebidduna ma aha in gaalada naarta laga soo bixin ama ehelu jannuhu ka bixi ee waa in ciddii ashahaadata laga bixin naarta, mu'miniintuna ay ku waari jannada sida aayadda ka muuqata dhammaadkeeda. **[Huud: 102-108].**

109. Ha ka shakin (xumaanta) waxay caabudi kuwaasu, ma caabudayaan waxay aabayaalkood caabudayeen mar hore mooyee, waana u

فَلَا تَكُ فِى مِرْيَةٍ مِّمَّا يَعْبُدُ هَٰٓؤُلَآءِ ۚ مَا يَعْبُدُونَ إِلَّا كَمَا يَعْبُدُ ءَابَآؤُهُم مِّن قَبْلُ ۚ وَإِنَّا لَمُوَفُّوهُمْ نَصِيبَهُمْ غَيْرَ مَنقُوصٍ ﴿١٠٩﴾

dhammaynaynaa qaybtooda (ciqaabta), oon laga nusqaaminayn.

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا مُوسَى ٱلْكِتَٰبَ فَٱخْتُلِفَ فِيهِ ۚ وَلَوْلَا كَلِمَةٌ سَبَقَتْ مِن رَّبِّكَ لَقُضِىَ بَيْنَهُمْ ۚ وَإِنَّهُمْ لَفِى شَكٍّ مِّنْهُ مُرِيبٍ ﴿١١٠﴾

110. Waxaan siinnay (Nabi) Muuse kitaabka (tawreed) waana laysku khilaafay, hadduunan jirin hadal Allehaa oo horreeyey waa lakala xugmin lahaa dhexdooda, waxayna iyagu kaga sugan yihiin shaki daran.

وَإِنَّ كُلًّا لَّمَّا لَيُوَفِّيَنَّهُمْ رَبُّكَ أَعْمَٰلَهُمْ ۚ إِنَّهُۥ بِمَا يَعْمَلُونَ خَبِيرٌ ﴿١١١﴾

111. Dhammaan wuu u oofin Allehaa camalkooda illeen Alle waxay camal fali wuu og yahay.

فَٱسْتَقِمْ كَمَآ أُمِرْتَ وَمَن تَابَ مَعَكَ وَلَا تَطْغَوْا ۚ إِنَّهُۥ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿١١٢﴾

112. Ee u toosnow sida lagu faray adiga iyo inta kula toobadkeentay hana xadgudbina illeen Alle waxaad camal falaysaan wuu arkaaye.

وَلَا تَرْكَنُوٓا۟ إِلَى ٱلَّذِينَ ظَلَمُوا۟ فَتَمَسَّكُمُ ٱلنَّارُ وَمَا لَكُم مِّن دُونِ ٱللَّهِ مِنْ أَوْلِيَآءَ ثُمَّ لَا تُنصَرُونَ ﴿١١٣﴾

113. Ha u iilannina kuwa dulmi falay oo naaru idin taabato, idiinmana sugno Alle ka sokow awliyo markaas, laydiinna gargaari maayo.

Wuxuu Alle ku adkeeyey Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) iyo ummaddiisaba inayan ka shakiyin xumaanta waxay caabudi gaalada iyo aabayaalkoodii hore, cid walbana waxaa loo dhammayn abaalkeeda, kitaabkii Nabi Muusana waa laysku khilaafay haddaan Alle horay u iraadaynna waa lakala xukumi lahaa, waxayna ku sugan yihiin shaki daran, una toosnaada sida laydin faray, hana kibrina illeen Alle wax kama qarsoonee, hana u iilannina kuwa dulmiga falay oo markaas naaru idin taabato, wax Alle ka soo hadhay oo idiin gargaarina uusan jirin.

Abul Caaliya wuxuu yidhi: haka raalli noqonnina camalka gaalada, Ibnu Cabaasna wuxuu yidhi: ha u iilannina kuwa dulmiga falay, aayaduhuna waxay soo jeedin in xumaanta si dhaba loo garto, lana toosnaado, daalimiintana aan loo iilan oon raalli laga noqon, taasi waxay ku tusin xumaanta iyo darraanta dulmiga cid fasha iyo mid gacan ku siisaba. **[Huud: 109-113].**

وَأَقِمِ ٱلصَّلَوٰةَ طَرَفَيِ ٱلنَّهَارِ وَزُلَفًا مِّنَ ٱلَّيۡلِۚ إِنَّ ٱلۡحَسَنَٰتِ يُذۡهِبۡنَ ٱلسَّيِّـَٔاتِۚ ذَٰلِكَ ذِكۡرَىٰ لِلذَّٰكِرِينَ ﴿١١٤﴾

114. Oog salaadda maalinta darfaheeda iyo qaybo habeenka ka mida (saacaad) illeen wanaaggu wuxuu tegsiiyaa (tirtiraa) xumaantee, taasina waa waanada kuwa Ilaah xuska badan.

وَٱصۡبِرۡ فَإِنَّ ٱللَّهَ لَا يُضِيعُ أَجۡرَ ٱلۡمُحۡسِنِينَ ﴿١١٥﴾

115. Samir (adkayso) Ilaahay ma dayaco ajirka kuwa sama falee

فَلَوۡلَا كَانَ مِنَ ٱلۡقُرُونِ مِن قَبۡلِكُمۡ أُوْلُواْ بَقِيَّةٖ يَنۡهَوۡنَ عَنِ ٱلۡفَسَادِ فِي ٱلۡأَرۡضِ إِلَّا قَلِيلٗا مِّمَّنۡ أَنجَيۡنَا مِنۡهُمۡۗ وَٱتَّبَعَ ٱلَّذِينَ ظَلَمُواْ مَآ أُتۡرِفُواْ فِيهِ وَكَانُواْ مُجۡرِمِينَ ﴿١١٦﴾

116. Maxay uga mid ahaan waayeen quruumihii hore dad khayr (caqli) leh oo ka reeba fasaadka dhulka, wax yar mooyee oo ka mida kuwaan korinnay xaggooda, waxayna raaceen kuwii dulmi falay wixii loogu raaxeeyey, waxayna ahaayeen dambiilayaal.

وَمَا كَانَ رَبُّكَ لِيُهۡلِكَ ٱلۡقُرَىٰ بِظُلۡمٖ وَأَهۡلُهَا مُصۡلِحُونَ ﴿١١٧﴾

117. Alle na uma halaago magaalo dulmi iyadoo ehelkeedu wax wanaajin.

وَلَوۡ شَآءَ رَبُّكَ لَجَعَلَ ٱلنَّاسَ أُمَّةٗ وَٰحِدَةٗۖ وَلَا يَزَالُونَ مُخۡتَلِفِينَ ﴿١١٨﴾

118. Hadduu doono Allehaa wuxuu ka yeeli lahaa dadka mid kaliya mana ka tagaan inay yihiin kuwo iskhilaafsan.

إِلَّا مَن رَّحِمَ رَبُّكَۚ وَلِذَٰلِكَ خَلَقَهُمۡۗ وَتَمَّتۡ كَلِمَةُ رَبِّكَ لَأَمۡلَأَنَّ جَهَنَّمَ مِنَ ٱلۡجِنَّةِ وَٱلنَّاسِ أَجۡمَعِينَ ﴿١١٩﴾

119. Cid Alle u naxariistay mooyee, saasaana Alle ku abuuray, wayna taam noqotay kalimadii Allehaa oo ah inuu ku buuxiyo jahannamo jinni iyo insi dhammaan.

120. Dhammaan waxaannu kaaga qisoon wararkii rasuullada waxaan ku sugno qalbigaaga, waxaana tan kuugu yimid xaq iyo wacdi iyo waanada mu'miniinta.

وَكُلًّا نَّقُصُّ عَلَيْكَ مِنْ أَنۢبَآءِ ٱلرُّسُلِ مَا نُثَبِّتُ بِهِۦ فُؤَادَكَ ۚ وَجَآءَكَ فِى هَٰذِهِ ٱلْحَقُّ وَمَوْعِظَةٌ وَذِكْرَىٰ لِلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٢٠﴾

121. Waxaad ku dhahdaa kuwaan rumeynin ahaada sidiinnaas (ku camal fala) annana waannu «ahaan» camal faliye.

وَقُل لِّلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ ٱعْمَلُوا۟ عَلَىٰ مَكَانَتِكُمْ إِنَّا عَٰمِلُونَ ﴿١٢١﴾

122. Sugana annana waannu sugiye.

وَٱنتَظِرُوٓا۟ إِنَّا مُنتَظِرُونَ ﴿١٢٢﴾

123. Alle waxaa u sugnaaday waxa ku maqan samooyinka iyo dhulka, xaggiisaana loo celin amarka dhammaan ee caabud oo talo saaro, Alle na ma halmaansana waxaad falaysaan.

وَلِلَّهِ غَيْبُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَإِلَيْهِ يُرْجَعُ ٱلْأَمْرُ كُلُّهُۥ فَٱعْبُدْهُ وَتَوَكَّلْ عَلَيْهِ ۚ وَمَا رَبُّكَ بِغَٰفِلٍ عَمَّا تَعْمَلُونَ ﴿١٢٣﴾

Salaadda waa in loo dadaalo illeen wanaaggaa tirtira xumaantee, shanta salaadood iyo salaadda jimce iyo soonku waxay gudaan asturaanna waxa u dhaxeeya haddii dambi wayn laga tago siduu Nabigu yidhi, waana in la adkaysto si Alle wanaag noogu abaal mariyo, caqli iyo diinna la yeesho oo xumaanta la reebo, iyo fasaadinta dhulka iyo dulmi iyo raaxo xun jacaylka isagoo dambiile la yahay, Alle na waa caadil oo ma halaago cid toosan dulmin dartiis, Alle na hadduu doono dadka wuxuu ka dhigi lahaa mid kaliya kamase tagaan khilaaf cid Alle u naxariistay mooyee, waxaase Alle hormariyey in jahannamo laga buuxin jinni iyo insi. Waxa la soo sheegay oo wararkii rasuullada ahna waxaa lagu adkayn niyadda Nabiga. **[Huud: 114-123].**

Suurat Yuusuf

سُورَةُ يُوسُفَ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Xuruufta hore waxay ku tusin mucjisada quraanka, tanna waa aayaadkii kitaabka cad (quraanka).

الٓرۚ تِلْكَ ءَايَٰتُ ٱلْكِتَٰبِ ٱلْمُبِينِ ﴿١﴾

2. Annagaana soo dejinnay isagoo quraan carabi ah inaad kastaan.

إِنَّآ أَنزَلْنَٰهُ قُرْءَٰنًا عَرَبِيًّا لَّعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ ﴿٢﴾

3. Annagaa kaaga qisoon qisooyin tan u fiican waxyigaan quraankan kuu waxyoonay dartiis, waxaadna ka mid ahayd hortiisa kuwaan wax ogayn.

نَحْنُ نَقُصُّ عَلَيْكَ أَحْسَنَ ٱلْقَصَصِ بِمَآ أَوْحَيْنَآ إِلَيْكَ هَٰذَا ٱلْقُرْءَانَ وَإِن كُنتَ مِن قَبْلِهِۦ لَمِنَ ٱلْغَٰفِلِينَ ﴿٣﴾

4. Markuu (Nabi) Yuusuf ku yidhi aabbihiis aabow waxaan arkay kaw iyo toban xiddigood iyo qorraxda iyo dayaxa waxaan arkay iyagoo ii sujuudsan.

إِذْ قَالَ يُوسُفُ لِأَبِيهِ يَٰٓأَبَتِ إِنِّى رَأَيْتُ أَحَدَ عَشَرَ كَوْكَبًا وَٱلشَّمْسَ وَٱلْقَمَرَ رَأَيْتُهُمْ لِى سَٰجِدِينَ ﴿٤﴾

5. Wuxuuna yidhi (aabbihiis Yacquub) wiilkayow hawga qisoonin riyadaada walaalahaa oy markaas ku dhagraan dhagar, illeen shaydaanku dadka wuxuu u yahay col cade.

قَالَ يَٰبُنَىَّ لَا تَقْصُصْ رُءْيَاكَ عَلَىٰٓ إِخْوَتِكَ فَيَكِيدُوا۟ لَكَ كَيْدًا ۖ إِنَّ ٱلشَّيْطَٰنَ لِلْإِنسَٰنِ عَدُوٌّ مُّبِينٌ ﴿٥﴾

6. Saasuuna kuu doortay Allehaa kuuna baray fasiraadda riyada iyo xadiithyada, kuuna taam

وَكَذَٰلِكَ يَجْتَبِيكَ رَبُّكَ وَيُعَلِّمُكَ مِن تَأْوِيلِ ٱلْأَحَادِيثِ وَيُتِمُّ نِعْمَتَهُۥ عَلَيْكَ

وَعَلَىٰٓ ءَالِ يَعۡقُوبَ كَمَآ أَتَمَّهَا عَلَىٰٓ أَبَوَيۡكَ مِن قَبۡلُ إِبۡرَٰهِيمَ وَإِسۡحَٰقَۚ إِنَّ رَبَّكَ عَلِيمٌ حَكِيمٞ ٦

yeeli nicmadiisa korkaaga iyo Yacquub ehelkiisa siduu ugu taamyeelay labadaadii waalid mar hore (Nabi) Ibraahim iyo (Nabi) Isxaaq, Rabbigaana waa oge falsan.

Ibnu Kathiir wuxuu yidhi: Alle ayaa quraanka ku soo dejiyey luqada u sharaf badan, kitaabka u sharaf badan, Nabiga ugu sharaf badan, malagga u sharaf badan, meesha u sharaf badan, bisha u sharaf badan, saasuuna dhan walba kaamil uga noqday. Qisada Nabi Yuusufna waa wax layaable Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ma oqoon waxyiga ka hor. Wuxuuna arkay Nabi Yuusuf kaw iyo toban xiddigood iyo qorraxda iyo dayaxa oo u sujuudi, aabihiina wuxuu faray inuu ka qariyo walaalihiis si ayna u xasdin una shirqoolin, illeen shaydaanbaa dadka weheliya colna u ah, Alle ayaa doortay Nabi Yuusuf barayna cilmi iyo fasiraadda riyada una nicmeeyey isaga iyo ehelkii Yacquub ba, aabihiis iyo aabbayaalkiisii hore Nabi Ibraahim iyo Nabi Isxaaq, Nabiguna wuxuu yidhi: kii fiicnaa ee mid fiican dhalay mid fiicanna sii dhalay mid fiicanna sii dhalay waa Yuusuf binu Yacquub binu Isxaaq binu Ibraahim. Nabiyadoo dhanna waa sharaf badan yihiin sida Nabigeenna. **[Yuusuf: 1-6].**

* لَّقَدۡ كَانَ فِي يُوسُفَ وَإِخۡوَتِهِۦٓ ءَايَٰتٞ لِّلسَّآئِلِينَ ٧

7. Yuusuf iyo walaalihiis calaamad baa ugu sugan kuwa warsan (waano).

إِذۡ قَالُواْ لَيُوسُفُ وَأَخُوهُ أَحَبُّ إِلَىٰٓ أَبِينَا مِنَّا وَنَحۡنُ عُصۡبَةٌ إِنَّ أَبَانَا لَفِي ضَلَٰلٖ مُّبِينٍ ٨

8. Markay dheheen Yuusuf iyo walaalkiis yaa aabbe naga jecel yahay inagoo koox ah, aabbeheen wuxuu ku sugan yahay baadi cad (jecaylkaas).

ٱقۡتُلُواْ يُوسُفَ أَوِ ٱطۡرَحُوهُ أَرۡضٗا يَخۡلُ لَكُمۡ وَجۡهُ أَبِيكُمۡ وَتَكُونُواْ مِنۢ بَعۡدِهِۦ قَوۡمٗا صَٰلِحِينَ ٩

9. Dila Yuusuf ama ku tuura dhulka ha idiin kaliyoobo wajiga aabbihiine aanada ahaateen gadaashiis qoom suubane.

قَالَ قَآئِلٞ مِّنۡهُمۡ لَا تَقۡتُلُواْ يُوسُفَ وَأَلۡقُوهُ فِي غَيَٰبَتِ ٱلۡجُبِّ يَلۡتَقِطۡهُ بَعۡضُ ٱلسَّيَّارَةِ إِن كُنتُمۡ فَٰعِلِينَ ١٠

10. Mid ka midaa yidhi ha dilina Yuusuf ee ku tuura ceel salkiis ha qaateen qaar safaree haddaad wax falaysaan.

11. Waxay dheheen aabbow maxaad noogu aamini la'dahay Yuusuf anagoo u naasixa.

قَالُواْ يَـٰٓأَبَانَا مَا لَكَ لَا تَأۡمَنَّا عَلَىٰ يُوسُفَ وَإِنَّا لَهُۥ لَنَٰصِحُونَ ﴿١١﴾

12. Nala dir barri ha cuno hana ciyaaree anaguna isaga waannu ilaaline.

أَرۡسِلۡهُ مَعَنَا غَدٗا يَرۡتَعۡ وَيَلۡعَبۡ وَإِنَّا لَهُۥ لَحَٰفِظُونَ ﴿١٢﴾

13. Wuxuu yidhi Yacquub waxaa i walbahaarin inaad la tegtaan waxaana ka cabsan in yeeyi cunto idinkoo halmaansan.

قَالَ إِنِّي لَيَحۡزُنُنِيٓ أَن تَذۡهَبُواْ بِهِۦ وَأَخَافُ أَن يَأۡكُلَهُ ٱلذِّئۡبُ وَأَنتُمۡ عَنۡهُ غَٰفِلُونَ ﴿١٣﴾

14. Waxay dheheen hadday yey cunto annagoo kooxa waxaan ka mid nahay kuwa khasaaray.

قَالُواْ لَئِنۡ أَكَلَهُ ٱلذِّئۡبُ وَنَحۡنُ عُصۡبَةٌ إِنَّآ إِذٗا لَّخَٰسِرُونَ ﴿١٤﴾

Qisada Nabi Yuusuf iyo walaalihiis waxaa ku sugan waano iyo xusuus. Waxayna ku tashadeen xasad dartiis inay ama dilaan Yuusuf ama ceel ku ridaan, ugu dambayn midbaa u soo jeediyey inay ceel ku ridaan, aabahood bayna warsadeen wuxuu ugu aamini la'yahay Yuusuf, waxayna warsadeen in la diro ha la soo ciyaaree, wuxuuna u sheegay inuu ka walbahaarini inay la tagaan uuna dugaag uga cabsan, waxayse sheegeen inay ilaalin oo dhawri oyna koox yihiin saasayna kula tageen. Maxamed binu Isxaaq wuxuu yidhi: waxay isku waafaqeen arrin wayn oo ah qaraabo goys, caaq waalid, naxariis darro, iyagoo kala gayn ilmo yar iyo oday aabihiisa oo duqa.

Waana arrin wayn waana in laga fogaado waxaasoo kale illeen waa halaage. **[Yuusuf: 7-14].**

15. Markay la tageen oy ku kulmeen inay yeelaan ceel salkii, waxaan u waxyoonnay waad uga warrami amarkoodan iyagoon kasayn.

فَلَمَّا ذَهَبُواْ بِهِۦ وَأَجۡمَعُوٓاْ أَن يَجۡعَلُوهُ فِي غَيَٰبَتِ ٱلۡجُبِّۚ وَأَوۡحَيۡنَآ إِلَيۡهِ لَتُنَبِّئَنَّهُم بِأَمۡرِهِمۡ هَٰذَا وَهُمۡ لَا يَشۡعُرُونَ ﴿١٥﴾

16. Waxayna u yimaadeen aabahood habeenkii iyagoo ooyi.

وَجَآءُوٓ أَبَاهُمۡ عِشَآءٗ يَبۡكُونَ ﴿١٦﴾

17. Waxayna dhaheen aabbow waannu tagnay inaan orotonno waxaana ku dhaafnay Yuusuf alaabtannada agteeda

قَالُواْ يَـٰٓأَبَانَآ إِنَّا ذَهَبۡنَا نَسۡتَبِقُ وَتَرَكۡنَا يُوسُفَ عِندَ مَتَٰعِنَا فَأَكَلَهُ ٱلذِّئۡبُۖ وَمَآ أَنتَ بِمُؤۡمِنٖ لَّنَا وَلَوۡ كُنَّا صَٰدِقِينَ ﴿١٧﴾

markaasay yey cuntay aduguse nama rumaynaysid aanba run sheegnee.

18. Waxayna la yimaadeen qamiiskiisii oo dhiig beena leh, wuxuuna yidhi (yacquub) saas ma aha ee waxay idiin qurxisay naftiinnu arrin, (xaalkayguse) waa samir fiican Alle ayaana laga kaalmaystaa waxaad tilmaamaysaan.

وَجَآءُو عَلَىٰ قَمِيصِهِۦ بِدَمٍ كَذِبٍۚ قَالَ بَلْ سَوَّلَتْ لَكُمْ أَنفُسُكُمْ أَمْرًاۖ فَصَبْرٌ جَمِيلٌۖ وَٱللَّهُ ٱلْمُسْتَعَانُ عَلَىٰ مَا تَصِفُونَ ﴿١٨﴾

Way la tageen Yuusuf, waxayna isku waafaqeen inay ceel ku ridaan, markay ku rideenna Alle ayaa u waxyooday oo ogaysiiyay Yuusuf in cidhiidhigan farax ka danbayn ugana warrami walaalihiis xaalka iyagoon garanayn, si ay arrinta u adkeeyaan yay ula yimaadeen waqti habeena aabahood qamiis dhiig leh iyagoo ooyi oo sheegi inay Yuusuf ku dhaafteen alaabta agteeda iyaguna ciyaar iyo oroton aadeen halkaasna yey ku cuntay inkastoon aabbahood rumaynayn si kasta oy run u sheegaan, kuna yidhi naftiinnaa arrin idiin qurxisay, waxaanse samri samir fiican oon argagax lahayn Alle ayaana looga kaalmo warsadaa waxaad falaysaan waadna aragtaa inay wax dhoodhoobeen oohin, qamiis dhiigle, hadal qurxin in wiilkii yeey cuntay, taasina waxay nooga digi inaan lagu khaldamin muuqaalka iyo wax dhoodhoobka, caqli iyo Alle kaalmaysi, iyo kaadsiinyo iyo samir iyo adkaysina lagu socdo, thawri, wuxuu yidhi: sadex samirkay ka mid tahay: inaadan ka warramin xanuunkaaga, iyo dhibkaagan, naftaadana ammaanin. Bukhaarina wuxuu sheegay xaalkii Caa'isha iyo markay tidhi tusaale ma helayo aan ahayn kii Yacquub, xaalkay waa samir quruxsan Alle ayaana looga kaalmo warsadaa waxaad sheegaysaan, taasina waa xaalka mu'miniinta dhabta ah. **[Yuusuf: 15-18].**

19. Waxaa yimid socoto waxayna direen dhaamiye wuxuuna sii daayay wadaantiisii, wuxuuna yidhi bishaaradayda waa wiil, wayna qarsadeen isagoo badeeco ah, Alle na waa og yahay waxay fali.

وَجَآءَتْ سَيَّارَةٌ فَأَرْسَلُوا۟ وَارِدَهُمْ فَأَدْلَىٰ دَلْوَهُۥۖ قَالَ يَٰبُشْرَىٰ هَٰذَا غُلَٰمٌۚ وَأَسَرُّوهُ بِضَٰعَةًۚ وَٱللَّهُ عَلِيمٌۢ بِمَا يَعْمَلُونَ ﴿١٩﴾

20. Waxayna ku gadeen qiima jaban, dirhamo tirsan waxayna ahaayeen kuwaan rabin.

وَشَرَوْهُ بِثَمَنٍۭ بَخْسٍ دَرَاهِمَ مَعْدُودَةٍ وَكَانُوا۟ فِيهِ مِنَ ٱلزَّٰهِدِينَ ﴿٢٠﴾

21. Wuxuu ku yidhi kii gatay oo masar ah haweenaydiisii (wanaaji) ixtiraam hooygiisa waxay u dhawdahay inuu na anfaco ama ka yeelanno ilmo. Saasaana u makaninnay Yuusuf dhulka iyo inaan barro fasiraad «riyada» xadiithyada, Alle ayaana u adag arrinkiisa, laakiin badida dadku ma oga.

وَقَالَ ٱلَّذِى ٱشْتَرَىٰهُ مِن مِّصْرَ لِٱمْرَأَتِهِۦٓ أَكْرِمِى مَثْوَىٰهُ عَسَىٰٓ أَن يَنفَعَنَآ أَوْ نَتَّخِذَهُۥ وَلَدًا ۚ وَكَذَٰلِكَ مَكَّنَّا لِيُوسُفَ فِى ٱلْأَرْضِ وَلِنُعَلِّمَهُۥ مِن تَأْوِيلِ ٱلْأَحَادِيثِ ۚ وَٱللَّهُ غَالِبٌ عَلَىٰٓ أَمْرِهِۦ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٢١﴾

22. Markuu gaadhay xooggiisa yaan siinnay xigmad iyo cilmi (Nabinnimo) saasaana ku abaal marinnaa samafalayaasha.

وَلَمَّا بَلَغَ أَشُدَّهُۥٓ ءَاتَيْنَٰهُ حُكْمًا وَعِلْمًا ۚ وَكَذَٰلِكَ نَجْزِى ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿٢٢﴾

Alle isagaa awoodda cirka iyo dhulka iyo wax walba leh, wuxuuna u soo diray Yuusuf safar ka soo saaray ceelkii kuna bishaaraysatay, kuse gatay qiimi jaban illeen si dhib yar buu ku soo galaye oo way heleene, waxayna ka gadeen nin madaxa oo masara wuxuuna faray haweeneydiisii inay ixtiraamto, waxaa suurawda inay wiil ka dhigtaan ama anfacee, saasaana Alle Yuusuf u koriyay dhulkana u makaniyay una baray fasiraadda riyada iyo xadiithka, illeen Alle ayaa xaalka maamula una adage, in kastoon dadka badankiisu ogayn, markuu xoogaystayna oo caqligiisu buuxsamay yuu Alle siiyay cilmi iyo Nabinnimo, sidaasuuna Alle ku abaal mariyaa wanaag falayaasha.

Cabdullahi ibnu Mascuud wuxuu yidhi: waxaa wax u qiyaasi ogaa dadka saddex: ninkii Masar ee ku yidhi haweenayda ixtiraam Yuusuf, iyo tii tidhi aabaw noo ijaar (Nabi Muuse), iyo sayid Abii Bakar markuu sayid Cumar uu magacaabay. Saasayna ugu soo deg degtay Nabi Yuusuf naxaariistii iyo bishaaradii Allaha awoodda badan. **[Yuusuf: 19-22].**

23. Waxaa ka dalbatay naftiisa tii uu joogay gurigeeda waxayna xidhay albaabyadii waxayna ku tidhi kaalay, wuxuuna yidhi magan gal Ilaah, illeen waa sayidkaygii wuxuu wanaajiyay

وَرَٰوَدَتْهُ ٱلَّتِى هُوَ فِى بَيْتِهَا عَن نَّفْسِهِۦ وَغَلَّقَتِ ٱلْأَبْوَٰبَ وَقَالَتْ هَيْتَ لَكَ ۚ قَالَ مَعَاذَ ٱللَّهِ ۖ إِنَّهُۥ رَبِّىٓ أَحْسَنَ مَثْوَاىَ ۖ إِنَّهُۥ لَا يُفْلِحُ ٱلظَّٰلِمُونَ ﴿٢٣﴾

hoygaygee mana liibaanaan daalimiintu.

24. Way ku hammiday «doontay» isna waa ku hammiyey. Hadduusan arkin xujada Alle (waa ku dhici lahaa wuxuu ku hammiyey), saasaana uga iili xumaanta iyo falxumida illeen wuxuu ka mid yahay addomahannaga la doortay (camalkana u kali yeela Alle).

وَلَقَدْ هَمَّتْ بِهِۦ ۖ وَهَمَّ بِهَا لَوْلَآ أَن رَّءَا بُرْهَٰنَ رَبِّهِۦ ۚ كَذَٰلِكَ لِنَصْرِفَ عَنْهُ ٱلسُّوٓءَ وَٱلْفَحْشَآءَ ۚ إِنَّهُۥ مِنْ عِبَادِنَا ٱلْمُخْلَصِينَ ﴿٢٤﴾

25. Waxay u orotameen albaabka (irridda) waxayna ka goysay qamiiskiisa gadaasha waxayna kula kulmeen ninkeedii irridda agteeda, waxayna ku tidhi maxaa lagu abaal marin cid la doontay ehelkaaga (haweenaydaada) xumaan in la xidho ama cadibaad daran la gaadhsiiyo mooyee.

وَٱسْتَبَقَا ٱلْبَابَ وَقَدَّتْ قَمِيصَهُۥ مِن دُبُرٍ وَأَلْفَيَا سَيِّدَهَا لَدَا ٱلْبَابِ ۚ قَالَتْ مَا جَزَآءُ مَنْ أَرَادَ بِأَهْلِكَ سُوٓءًا إِلَّآ أَن يُسْجَنَ أَوْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٢٥﴾

Imtixaankii yaa wali daba socday Nabi Yuusuf waxaana hunguriyaysay haweenaydii uu gurigeeda joogay oo xidhay iridihii kuna tidhi kaalay, wuxuuse ka magan galay Alle, kumana haboona inuu khayaamo ninkii u wanaag falay, ee ku ixtiraamay gurigiisa ama Alle caasiyo illeen daalim ma liibaanee.

Way doontay haweenaydii Yuusuf naftiisa, isna wuu hammiyey, haddayna dhawridda iyo ilaalinta Alle jirin (waa ku dhici lahaa wixii uu hammiyey), Alle ayaase dhawray tusiyayna xujooyin iyo calaamad cabsi Alle ku sii abuurta, saasuuna Alle xumaanta uga dhawray illeen waxuu ka mid yahay addoomada Alle doortay camalkoodana Alle u kali yeela, wuxuuna u cararay xagga irridda wayna ka daba orodday oy ka goysay qamiiskiisii xagga danbe, waxayna kula kulmeen ninkeedii irridda agteeda, waxayse doontay inay Yuusuf ku rogto xumaanta waxayna la soo boodday inay ku tidhaahdo ninkeedii cidda xaaskaaga xumaan la doontay abaalkiisu waa in la xabiso ama ciqaab daran la dhadhan siiyo, halkaasna waxaa ka muuqday masabid iyo nabidda xaq darro ee dad ku talo galo iyo sida la isu dulmin. **[Yuusuf: 23-25].**

26. Wuxuu yidhi Nabi Yuusuf iyadaa iga dalabtay naftayda wuxuuna ku marag furay marag ehelkeeda ah hadduu qamiiskiisu ka go'an yahay xagga hore iyadaa run sheegi isna waa beenalayaasha.

قَالَ هِيَ رَٰوَدَتْنِي عَن نَّفْسِي ۚ وَشَهِدَ شَاهِدٌ مِّنْ أَهْلِهَآ إِن كَانَ قَمِيصُهُۥ قُدَّ مِن قُبُلٍ فَصَدَقَتْ وَهُوَ مِنَ ٱلْكَٰذِبِينَ ﴿٢٦﴾

27. Hadduu qamiiskiisu ka go'an yahay xagga danbana iyadaa beenalaay ah isna (yuusuf) wuxuu ka mid yahay runlayaasha.

وَإِن كَانَ قَمِيصُهُۥ قُدَّ مِن دُبُرٍ فَكَذَبَتْ وَهُوَ مِنَ ٱلصَّٰدِقِينَ ﴿٢٧﴾

28. Markuu arkay ninkeedii qamiiskii Yuusuf oo gadaal ka go'an wuxuu yidhi kaasi waa dhagartiinnii, dhagartiinnuna waa wayn tahay.

فَلَمَّا رَءَا قَمِيصَهُۥ قُدَّ مِن دُبُرٍ قَالَ إِنَّهُۥ مِن كَيْدِكُنَّ ۖ إِنَّ كَيْدَكُنَّ عَظِيمٌ ﴿٢٨﴾

29. Yuusufow iskaga jeedso xaalkan (ha ka warramin), haweeneeyahay adna ka dambi dhaaf warso Alle danbigaaga, waxaad ka mid tahay kuwa gafaye.

يُوسُفُ أَعْرِضْ عَنْ هَٰذَا ۚ وَٱسْتَغْفِرِي لِذَنۢبِكِ ۖ إِنَّكِ كُنتِ مِنَ ٱلْخَٰطِـِٔينَ ﴿٢٩﴾

Saasuu Alle u muujiyay ceeb iyo danbi la'aanta Nabi Yuusuf iyo in iyadu doontay isna diiday, waxaana sidaas si caddaalada ugu marag furay cid qaraabadeeda ka mida oo qamiiska Nabi Yuusuf ku kala xukuntay hadduu horay ka go'an yahay iyadaa run sheegi hadduu gadaal ka go'an yahayna isagaa run sheegi, markuu ninkeedii arkay inuu qamiisku gadaal ka go'an yahay oo xaalku u caddaaday wuxuu ku tuhmaystay haweenayda inay dhagar iyo khayaamo waddo, dhagartooduna wayn tahay, wuxuuna u soo jeediyay Yuusuf inuu ka gaabsado xaalkan kana warramin, iyadana wuxuu faray inay ka toobad keento arintaas ay doontay ee dhicin iyo masabidka Yuusuf. Halkaasna ugama bannaana in cidu Yuusuf wax ka sheegto illeen wuxuu ahaa Nabi dhawrsoon oo sharafle sida Alle caddeeyay. Markhaatiguna ama ha ahaado cid guriga joogtay, ama ilmo yar oo hadlay waxaase muhiim ah in Alle bari yeelay Nabi Yuusuf, saasuuna Alle ceebta uga dhawraa mu'miniinta is dhawrta iyaga iyo ehelkoodaba, waana qiso aad u xeel dheer. **[Yuusuf: 26-29].**

٣٠ * وَقَالَ نِسْوَةٌ فِي ٱلْمَدِينَةِ ٱمْرَأَتُ ٱلْعَزِيزِ تُرَٰوِدُ فَتَىٰهَا عَن نَّفْسِهِۦ ۖ قَدْ شَغَفَهَا حُبًّا ۖ إِنَّا لَنَرَىٰهَا فِي ضَلَٰلٍ مُّبِينٍ ٣٠

30. Waxayna dheheen haweenkii magaalada haweenaydii Casiis (wasiirka) waxay dooni khaadimkeeda naftiisa (la nool) jeceylkiisaa qalbiga ka galay, waxaana ku aragnaa baadi cad.

٣١ فَلَمَّا سَمِعَتْ بِمَكْرِهِنَّ أَرْسَلَتْ إِلَيْهِنَّ وَأَعْتَدَتْ لَهُنَّ مُتَّكَـًٔا وَءَاتَتْ كُلَّ وَٰحِدَةٍ مِّنْهُنَّ سِكِّينًا وَقَالَتِ ٱخْرُجْ عَلَيْهِنَّ ۖ فَلَمَّا رَأَيْنَهُۥٓ أَكْبَرْنَهُۥ وَقَطَّعْنَ أَيْدِيَهُنَّ وَقُلْنَ حَٰشَ لِلَّهِ مَا هَٰذَا بَشَرًا إِنْ هَٰذَآ إِلَّا مَلَكٌ كَرِيمٌ ٣١

31. Markay maqashay dhagartooda (xantoodii) way u farriin dirtay waxayna u darabtay fadhi (martiqaad) waxayna siisay mid kasta mindi waxayna ku tidhi Yuusuf ku soo bax markay arkeenna way wayneysteen waxayna iska gooyeen «sareen» gacmaha (faraha) waxayna dheheen xaashaa lillaah kani bashar (dad) ma aha kani waxaan malag sharaf leh ahayn ma aha.

٣٢ قَالَتْ فَذَٰلِكُنَّ ٱلَّذِي لُمْتُنَّنِي فِيهِ ۖ وَلَقَدْ رَٰوَدتُّهُۥ عَن نَّفْسِهِۦ فَٱسْتَعْصَمَ ۖ وَلَئِن لَّمْ يَفْعَلْ مَآ ءَامُرُهُۥ لَيُسْجَنَنَّ وَلَيَكُونًا مِّنَ ٱلصَّٰغِرِينَ ٣٢

32. Waxay tidhi kaasi waa waxaad igu dagaasheen anaa ka doonay naftiisa wuuna is dhawray hadduusanse falin waxaan fari wallee waa la xabisi oo uu noqon kuwa dullooba.

Waxaa magaaladi ku faafay warkii haweeneydaas iyo Yuusuf, waxayna haweenkii magaaladu ku sheekeysteen in haweeneydii Casiis oo ahaa wasiir ay dooni wiilkii gurigegeda joogay Yuusuf, jeceylkiisuna qalbiga ka galay, ayna ku sugan tahay baadi cad, markay warkii iyo xantoodii maqashayna waxay u samaysay martiqaad iyo wax la jarjaro waxayna u dhiibtay mindiyo, Yuusufna waxay amartay inuu u soo baxo, markay arkeenna way la yaabeen oo waynaysteen oo farihii iska sareen intay dhawriddiisa mashquul ku ahaayeen, waxayna sheegeen inuusan Yuusuf dad ahayn ee malag sharf badan yahay, markaasay iyagii ku soo jeedsatay oo ku tidhi wakaas waxaad igu dagaalayseen inaad idinba faraha iska goyseen, anaana doonay naftiisa haddana haduusan falin waxaan fari waa la xabbisi oo noqon kuwa dullooba.

Halkaasna waxaa ka muuqda in ciddii Alle dhawro iyana is dhawrta Alle ka fogayn xumaan iyo ceeb, iyo nadaafaddii Nabi Yuusuf iyo siday ugu caddaysay haweenkii dhabta illeen Nabiyada Alle ayaa ilaaliyaye. **[Yuusuf: 30-32].**

قَالَ رَبِّ ٱلسِّجْنُ أَحَبُّ إِلَيَّ مِمَّا يَدْعُونَنِيٓ إِلَيْهِ ۖ وَإِلَّا تَصْرِفْ عَنِّي كَيْدَهُنَّ أَصْبُ إِلَيْهِنَّ وَأَكُن مِّنَ ٱلْجَٰهِلِينَ ﴿٣٣﴾

33. Wuxuuna yidhi (Nabi Yuusuf) Allow xabbis baan ka jeclahay waxay iigu yeedhi haddaadan iga iilin dhagartooda waan u iilan xaggooda waxaana aan ka mid noqon jaahiliinta.

فَٱسْتَجَابَ لَهُۥ رَبُّهُۥ فَصَرَفَ عَنْهُ كَيْدَهُنَّ ۚ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْعَلِيمُ ﴿٣٤﴾

34. Waxaana ajiibay Allehiis wuuna ka iilay dhagartooda illeen Alle waa maqle og.

ثُمَّ بَدَا لَهُم مِّنۢ بَعْدِ مَا رَأَوُا۟ ٱلْـَٔايَٰتِ لَيَسْجُنُنَّهُۥ حَتَّىٰ حِينٍ ﴿٣٥﴾

35. Markaasaa waxaa u muuqday ka dib markay arkeen aayaad (calaamooyin) inay xidhaan tan iyo muddo.

وَدَخَلَ مَعَهُ ٱلسِّجْنَ فَتَيَانِ ۖ قَالَ أَحَدُهُمَآ إِنِّيٓ أَرَىٰنِيٓ أَعْصِرُ خَمْرًا ۖ وَقَالَ ٱلْءَاخَرُ إِنِّيٓ أَرَىٰنِيٓ أَحْمِلُ فَوْقَ رَأْسِي خُبْزًا تَأْكُلُ ٱلطَّيْرُ مِنْهُ ۖ نَبِّئْنَا بِتَأْوِيلِهِۦٓ ۖ إِنَّا نَرَىٰكَ مِنَ ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿٣٦﴾

36. Waxaana la galay xabbiska laba dhalinyara ah, midkood baana yidhi: waxaan arkay (riyo) anoo miiri khamro, kii kalana wuxuu yidhi anna waxaan arkay anoo ku xambaari madaxayga korkiisa khubus (kibis) kana cunayso shimbirtu xaggiisa nooga warran fasiraadda waxaan kugu aragnaa inaad ka mid tahay sama falayaashee.

Nabi Yuusuf sida caadada dadka wanaagsan tahay wuxuu Alle ka baryey inuu ka koriyo dhagartooda naftiisana u iilan illeen waa banii Aadame, wuxuuna sheegay inuu xabbiska ka jecel yahay kana dooran waxay ugu yeedhi oo xumaana, intaas ka dibna waxay maslaxo moodeen dadkii hoggaaminayey halkaas in la xidho Nabi Yuusuf tan iyo muddo waana la xidhay, waxaana xabbiska la galay labo wiil oo dhalin yaro ah oo riyo arkay mid isagoo khamra miiri, midna isagoo khubus ama cunno madaxa ku xambaarsan shimbiruhuna wax ka cunayaan, waxayna warsadeen inuu u fasiro illeen waxay arkeen inuu nin fiican yahaye, wayna imaan doontaa fasiraaddii, aayaduhuna waxay ku tusin sharafkii Nabi Yuusuf iyo inuu xabbis ka dooran xumaan oo dhan, iyo

Alle la warsado kaalmo iyo dhawrid, iyo in Alle ajiibo baryada dadka suubban, iyo dhagartay ku sameeyeen Nabi Yuusuf oo iyagoo og inuusan dambi lahayn ay haddana xidheen si ay u asturaan haweeneeyda sumcaddeeda, iyo siduu u yiqiin fasiraadda riyada looguna yaqiinnay wanaag iyo sharaf iyo akhlaaq wanaagba, **[yuusuf: 33-36].**

قَالَ لَا يَأۡتِيكُمَا طَعَامٞ تُرۡزَقَانِهِۦٓ إِلَّا نَبَّأۡتُكُمَا بِتَأۡوِيلِهِۦ قَبۡلَ أَن يَأۡتِيَكُمَاۚ ذَٰلِكُمَا مِمَّا عَلَّمَنِي رَبِّيٓۚ إِنِّي تَرَكۡتُ مِلَّةَ قَوۡمٖ لَّا يُؤۡمِنُونَ بِٱللَّهِ وَهُم بِٱلۡأٓخِرَةِ هُمۡ كَٰفِرُونَ ٣٧

37. Wuxuu yidhi (Yuusuf) wixii cunna ah oo laydinku arzaaqo waxaan idiinka warrami fasirkiisa ka hor imaatinkiisa, kaasina waa waxaa Rabbigay i baray, anuguna waxaan ka tagay (nacay) milladda qoomkaan rumaynayn Alle oo aakhirana ka gaaloobay.

وَٱتَّبَعۡتُ مِلَّةَ ءَابَآءِيٓ إِبۡرَٰهِيمَ وَإِسۡحَٰقَ وَيَعۡقُوبَۚ مَا كَانَ لَنَآ أَن نُّشۡرِكَ بِٱللَّهِ مِن شَيۡءٖۚ ذَٰلِكَ مِن فَضۡلِ ٱللَّهِ عَلَيۡنَا وَعَلَى ٱلنَّاسِ وَلَٰكِنَّ أَكۡثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يَشۡكُرُونَ ٣٨

38. Waxaana aan raacay milladda (diinta) aabayaalkay Ibraahiim, Isxaaq iyo Yacquub, nuguma habboona inaan la wadaajinno Alle cibaadada waxna, taasina waa fadliga Alle ee korkannaga iyo dadkaba, laakiin dadka badankiisu kuma shugriyaan.

يَٰصَٰحِبَيِ ٱلسِّجۡنِ ءَأَرۡبَابٞ مُّتَفَرِّقُونَ خَيۡرٌ أَمِ ٱللَّهُ ٱلۡوَٰحِدُ ٱلۡقَهَّارُ ٣٩

39. Saaxiibadayda xabbiskow ma ilaahyo kala tagsan yaa khayr roon mise Ilaah kaliya ee awoodda badan.

مَا تَعۡبُدُونَ مِن دُونِهِۦٓ إِلَّآ أَسۡمَآءٗ سَمَّيۡتُمُوهَآ أَنتُمۡ وَءَابَآؤُكُم مَّآ أَنزَلَ ٱللَّهُ بِهَا مِن سُلۡطَٰنٍۚ إِنِ ٱلۡحُكۡمُ إِلَّا لِلَّهِۚ أَمَرَ أَلَّا تَعۡبُدُوٓاْ إِلَّآ إِيَّاهُۚ ذَٰلِكَ ٱلدِّينُ ٱلۡقَيِّمُ وَلَٰكِنَّ أَكۡثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يَعۡلَمُونَ ٤٠

40. Ma caabudaysaan Alle ka sokow waxaan magacyo aad magacowdeen ahayn idinka iyo aabayaalkiin oon Alle u soo dejinin xujo, xukunkana Alle mooyee cid kale ma leh, wuxuuna faray inaydaan caabudin isaga mooyee, saasaana diinta toosana laakiin dadka badankood ma oga.

Nabi Yuuusuf intuusan wali u fasirin riyaday warsadeen labada wiil wuxuu uga hormariyey inuu Alle ogaysiiyey cunnada loo keeni waxay tahay, uu nacayna diinta kuwaan rumeyn Alle iyo aakhiro oo ka gaaloobay, uu raacina diintii aabayaalkiis Nabi Ibraahim Nabi Isxaaq iyo Nabi Yacquub, waxaan Ilaahay ahayn ayan caabudayn. Taasina waa fadliga Alle siiyey iyaga iyo dadkaba inkastoon dadka badankii ku shugrineyn Alle, wuxuuna u sheegay in Alle kaliya ka khayr roon yahay ilaahyo badan oo kala tagsan, oo ah magacyo aan xujo lahayn ee layska magacaabay, xukunkana Alle ayaa iska leh, wuxuuna faray in isaga uun la caabudo, saasaana diinta toosana dadka badankiise ma oga, markaas ka dib yuu u sheegay warsigoodii. **[Yuusuf: 37-40].**

يَٰصَٰحِبَيِ ٱلسِّجۡنِ أَمَّآ أَحَدُكُمَا فَيَسۡقِي
رَبَّهُۥ خَمۡرٗاۖ وَأَمَّا ٱلۡأٓخَرُ فَيُصۡلَبُ
فَتَأۡكُلُ ٱلطَّيۡرُ مِن رَّأۡسِهِۦۚ قُضِيَ ٱلۡأَمۡرُ
ٱلَّذِي فِيهِ تَسۡتَفۡتِيَانِ ﴿٤١﴾

41. Saaxiibadayda xabbiskow midkiin wuxuu waraabin sayidkiisa khamro, kan kalase waa la wadhi (dili) oy shimbiruhu ka cuni madaxiisa, waana la xukumay amarkaad warsateen.

وَقَالَ لِلَّذِي ظَنَّ أَنَّهُۥ نَاجٖ مِّنۡهُمَا
ٱذۡكُرۡنِي عِندَ رَبِّكَ فَأَنسَىٰهُ ٱلشَّيۡطَٰنُ
ذِكۡرَ رَبِّهِۦ فَلَبِثَ فِي ٱلسِّجۡنِ بِضۡعَ
سِنِينَ ﴿٤٢﴾

42. Wuxuuna (Yuusuf) ku yidhi kii uu u maleeyay inuu nabad gali oo midkooda igu sheeg sayidkaaga agtiisa, waxaase halmaansiiyay shaydaan xusidda Allehiis, wuxuuna (Yuusuf) ku nagaaday xabbiska dhawr sano.

وَقَالَ ٱلۡمَلِكُ إِنِّيٓ أَرَىٰ سَبۡعَ بَقَرَٰتٖ
سِمَانٖ يَأۡكُلُهُنَّ سَبۡعٌ عِجَافٞ وَسَبۡعَ
سُنۢبُلَٰتٍ خُضۡرٖ وَأُخَرَ يَابِسَٰتٖۖ يَٰٓأَيُّهَا
ٱلۡمَلَأُ أَفۡتُونِي فِي رُءۡيَيَ إِن كُنتُمۡ لِلرُّءۡيَا
تَعۡبُرُونَ ﴿٤٣﴾

43. Xaakinkii wuxuu yidhi waxaan arkay todobo sac oo shilshilis (cayilan) oy cunayaan todobo wayda, iyo todobo sabuul oo cagaaran, iyo kuwo kaloo ingagan dad yahaw iiga warrama riyadayda hadaad fasiri kartaan riyada.

قَالُوٓاْ أَضۡغَٰثُ أَحۡلَمٖۖ وَمَا نَحۡنُ بِتَأۡوِيلِ
ٱلۡأَحۡلَٰمِ بِعَٰلِمِينَ ﴿٤٤﴾

44. Waxay dhaheen waa qaraw annaguna ma naqaanno fasirka qarawyada «dhadhabka».

Nabi Yuusuf wuxuu u fasiray riyadii isagoo ku yidhi midna sayidkiisa yuu khamri waraabin oo bixi midna waa la dili oo shimbirtu madaxa ka cuni waana xaal dhammaaday, wuxuuna faray kii baxayey inuu xusuusiyo sayidkiisa xaalka Yuusuf wuuse halmaamay, saasuuna Yuusuf xabbiska ugu nagaaday dhawr sano, markaasaa xaakimkii arkay riyo ah toddobo sac oo shil shilis oy cuni toddobo caata ah iyo toddobo sabuul oo cagaaran iyo kuwo kale oo ingagan, wuxuuna warsaday dadkii inay u fasiraan hadday garan fasiridda riyada, waxayse ugu jawaabeen inay tahay dhadhab iyo qarow iyana ayan aqoonin fasiraadda dhadhabka, waxaase soo socda in Yuusuf fasiri, aayaduhuna waxay ku tusin inay waajib tahay in dadka wanaagga la faro meel kasta ood joogto iyo in diinta xaqa ah ee Alle soo dejiyay isku mid tahay xagga usuusha iyo in laga fogaado jidka kuwa xun iyo in Alle kaliya la caabudo illeen isagaa amarka iska lahe. Yuusufna Alle ayaa baray fasiridda riyada. **[Yuusuf: 41-44].**

وَقَالَ ٱلَّذِى نَجَا مِنْهُمَا وَٱدَّكَرَ بَعْدَ أُمَّةٍ أَنَا۠ أُنَبِّئُكُم بِتَأْوِيلِهِۦ فَأَرْسِلُونِ ﴿٤٥﴾

45. Wuxuu yidhi kii nabadgalay oo midkooda markuu xasuustay muddo ka dib anaa idiinka warrami fasirkiisa ee i dira.

يُوسُفُ أَيُّهَا ٱلصِّدِّيقُ أَفْتِنَا فِى سَبْعِ بَقَرَٰتٍ سِمَانٍ يَأْكُلُهُنَّ سَبْعٌ عِجَافٌ وَسَبْعِ سُنۢبُلَٰتٍ خُضْرٍ وَأُخَرَ يَابِسَٰتٍ لَّعَلِّىٓ أَرْجِعُ إِلَى ٱلنَّاسِ لَعَلَّهُمْ يَعْلَمُونَ ﴿٤٦﴾

46. Wuxuu yidhi Yuusufow run badanow nooga warran toddoba sac oo shilshilis (cayilan) oy cunayaan todobo wayd ihi iyo todobo sabuul oo cagaaran iyo kuwo ingagan oo kale inaan ula noqdo, dadka inay ogaadaan.

قَالَ تَزْرَعُونَ سَبْعَ سِنِينَ دَأَبًا فَمَا حَصَدتُّمْ فَذَرُوهُ فِى سُنۢبُلِهِۦٓ إِلَّا قَلِيلًا مِّمَّا تَأْكُلُونَ ﴿٤٧﴾

47. Waxuuna yidhi waxaad tacbanaysaan todoba sano oo israacsan ee waxaad goosataan ku daaya sabuulkiisa wax yarood cunaysaan mooyee.

ثُمَّ يَأْتِى مِنۢ بَعْدِ ذَٰلِكَ سَبْعٌ شِدَادٌ يَأْكُلْنَ مَا قَدَّمْتُمْ لَهُنَّ إِلَّا قَلِيلًا مِّمَّا تُحْصِنُونَ ﴿٤٨﴾

48. Markaas waxaa imaan arrintaas ka dib todobo daran (abaara) oo cuni waxaad hor marsateen wax yar ood kaydsateen mooyee.

ثُمَّ يَأْتِى مِنۢ بَعْدِ ذَٰلِكَ عَامٌ فِيهِ يُغَاثُ ٱلنَّاسُ وَفِيهِ يَعْصِرُونَ ﴿٤٩﴾

49. Markaas ka dib waxaa imaan sano loo gargaaro dadka oo dhexdeeda ay wax miiran (barwaaqo).

Intaas ka dib kii nabad galay labadii wiil yaa xusuustay Nabi Yuusuf iyo siduu u fasirayay riyada wuxuuna codsaday in loo diro Yuusuf, waana loo diray, wuxuuna warsaday xaalka todobada sac ee shilis ee todobada caatada ahi cunayso, iyo todobada sabuul ee cagaaran iyo todobada ingagan wuxuuna u sheegay in barwaaqo imaan markaas abaaru dhici oy cuni wixii hore ee la kaydsaday ka dibna barwaaqo ka danbayn, wuxuuna u soo jeediyay inay wax kaydsadaan, taasina waxay ku tusin sida Alle Nabi Yuusuf u baray fasiraadda riyada iyo in Alle dadka ku imtixaamo barwaaqo iyo abaarba, iyo in wax la kaydsado oo laga gaashaanto dhibaatada inta la karo iyo in Alle yahay gargaaraha dadka dhibban. **[Yuusuf: 45-49].**

وَقَالَ ٱلۡمَلِكُ ٱئۡتُونِي بِهِۦۖ فَلَمَّا جَآءَهُ ٱلرَّسُولُ قَالَ ٱرۡجِعۡ إِلَىٰ رَبِّكَ فَسۡـَٔلۡهُ مَا بَالُ ٱلنِّسۡوَةِ ٱلَّٰتِي قَطَّعۡنَ أَيۡدِيَهُنَّۚ إِنَّ رَبِّي بِكَيۡدِهِنَّ عَلِيمٞ ٥٠

50. Wuxuu yidhi xaakimkii ii keena Yuusuf markuu kii loo diray u yimidna wuxuu ku yidhi ku noqo sayidkaaga oo warso muxuu ahaa xaalkii haweenkii iska saray farahooda Allehay waa og yahay dhagartooda.

قَالَ مَا خَطۡبُكُنَّ إِذۡ رَٰوَدتُّنَّ يُوسُفَ عَن نَّفۡسِهِۦۚ قُلۡنَ حَٰشَ لِلَّهِ مَا عَلِمۡنَا عَلَيۡهِ مِن سُوٓءٖۚ قَالَتِ ٱمۡرَأَتُ ٱلۡعَزِيزِ ٱلۡـَٰٔنَ حَصۡحَصَ ٱلۡحَقُّ أَنَا۠ رَٰوَدتُّهُۥ عَن نَّفۡسِهِۦ وَإِنَّهُۥ لَمِنَ ٱلصَّٰدِقِينَ ٥١

51. Wuxuu yidhi xaakimkii xaalkiinnu muxuu ahaa markaad ka doonteen Yuusuf naftiisa waxayna dhaheen Alle ayaa xumaan ka nasahane kuma ogin xumaan, waxayna tidhi haweenaydii wasiirka hadduu caddaaday xaqii anaa ka dalbay Yuusuf naftiisa isaguna run buu sheegi.

ذَٰلِكَ لِيَعۡلَمَ أَنِّي لَمۡ أَخُنۡهُ بِٱلۡغَيۡبِ وَأَنَّ ٱللَّهَ لَا يَهۡدِي كَيۡدَ ٱلۡخَآئِنِينَ ٥٢

52. Arrintaasna waa inuu ogaado inaanan khayaamin isagoo maqan iyo inuusan Alle toosinin dhagarta khaa'imiinta.

* وَمَآ أُبَرِّئُ نَفۡسِيٓۚ إِنَّ ٱلنَّفۡسَ لَأَمَّارَةُۢ بِٱلسُّوٓءِ إِلَّا مَا رَحِمَ رَبِّيٓۚ إِنَّ رَبِّي غَفُورٞ رَّحِيمٞ ٥٣

53. Mana bari yeelayo naftayda, naftu waa farid badan tahay xumaanta naxariis Rabbigay mooyee Rabbigayna waa dambi dhaafe naxariista.

54. Wuxuu yidhi xaakimkii ii keena Yuusuf gooni ha ii ahaadee (talinta) markuu la hadlayna wuxuu yidhi adigu maanta agtannada waxaad ku tahay sharafle aamina.

وَقَالَ ٱلْمَلِكُ ٱئْتُونِى بِهِۦٓ أَسْتَخْلِصْهُ لِنَفْسِى ۖ فَلَمَّا كَلَّمَهُۥ قَالَ إِنَّكَ ٱلْيَوْمَ لَدَيْنَا مَكِينٌ أَمِينٌ ﴿٥٤﴾

55. Wuxuuna yidhi Yuusuf iga yeel masuulka khasnadaha dhulka waxaan ahay aamin cilmi lehe.

قَالَ ٱجْعَلْنِى عَلَىٰ خَزَآئِنِ ٱلْأَرْضِ ۖ إِنِّى حَفِيظٌ عَلِيمٌ ﴿٥٥﴾

Markay muuqatay sharaftii iyo aqoontii Nabi Yuusuf yuu Xaakimkii u cid diray in loo keeno, Yuusufse wuu soo celiyay farriintii isagoo warsan xaalkii haweenkii dhagrayay, markuu Xaakimkii warsadayna waxay sheegeen inayna xumaan ku ogayn Yuusuf, markaas waxaa dhabtii sheegtay haweenaydii wasiirka oo tidhi: hadduu xaqii cadaaday anaa dalbay isna waa runle, saasaana dhacday inuu ogaado wasiirku inayna khayaamo dhicin isagoo maqan, Alle na toosinayn dhagarta khaa'imiinta, mana bari yeelo naftayda, naftuna waa xumaan fala cid Alle u naxariisto mooyee, waana hadalkii haweenayda, Xaakimkii wuxuu Yuusuf ka dhigay la taliyihiisa gaarka, wuxuuna codsaday Nabi Yuusuf in laga dhigo masuulka khasnadaha xoolaha ee dhulka Masar illeen waa aamin cilmi lehe.

Taasina waxay ku tusin samirkii Nabi Yuusuf, sida Alle u bari yeeli addoomadiisa suubban, in xaqii caddaaday, inuusan khaa'in liibaanayn, nafta khatarsanideeda, in Xaakimkii dhawaystay Nabi Yuusuf, iyo inuu dalbay in loo dhiibo khasnadaha dhulka illeen waa aamin cilmi lehe. **[Yuusuf: 50-55].**

56. Saasaan u makaninay Yuusuf dhulka (Masar) kagana tasarrufi oo degi meeshuu doono, waxaan gaadhsiinnaa naxariistanada ciddaan doonno mana dhuminayno ajirka samo falayaasha.

وَكَذَٰلِكَ مَكَّنَّا لِيُوسُفَ فِى ٱلْأَرْضِ يَتَبَوَّأُ مِنْهَا حَيْثُ يَشَآءُ ۚ نُصِيبُ بِرَحْمَتِنَا مَن نَّشَآءُ ۖ وَلَا نُضِيعُ أَجْرَ ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿٥٦﴾

57. Ajirka aakhiraana u khayrroon kuwa rumeeyey (xaqa) oo ah kuwa dhawrsada.

وَلَأَجْرُ ٱلْءَاخِرَةِ خَيْرٌ لِّلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَكَانُوا۟ يَتَّقُونَ ﴿٥٧﴾

58. Waxaana yimid Yuusuf walaalihiis wayna u soo galeen wuuna aqoonsaday iyagoon garanayn.

وَجَآءَ إِخْوَةُ يُوسُفَ فَدَخَلُوا۟ عَلَيْهِ فَعَرَفَهُمْ وَهُمْ لَهُۥ مُنكِرُونَ ﴿٥٨﴾

59. Markuu darbay rarkoodii (u oofiyey miisiddii) wuxuu ku yidhi ii keena walaalkiinna aabbe, miyeydaan arkayn inaan oofiyo kaylka «miiska» ahayna mid dejin fiican.

وَلَمَّا جَهَّزَهُم بِجَهَازِهِمْ قَالَ ٱئْتُونِى بِأَخٍ لَّكُم مِّنْ أَبِيكُمْ ۚ أَلَا تَرَوْنَ أَنِّىٓ أُوفِى ٱلْكَيْلَ وَأَنَا۠ خَيْرُ ٱلْمُنزِلِينَ ﴿٥٩﴾

60. Haddaydaan ii keeninna agtayda miisid kama helaysaan hana ii soo dhawaannina.

فَإِن لَّمْ تَأْتُونِى بِهِۦ فَلَا كَيْلَ لَكُمْ عِندِى وَلَا تَقْرَبُونِ ﴿٦٠﴾

61. Waxay dheheen waannu ka dalbi aabbihiis waana falaynaa (sidaas).

قَالُوا۟ سَنُرَٰوِدُ عَنْهُ أَبَاهُ وَإِنَّا لَفَٰعِلُونَ ﴿٦١﴾

62. Wuxuuna ku yidhi dhallinyaradiisii yeela alaabtooda (badeecadooda) rarka dhexdiisa si ay u aqoonsadaan markay ku noqdaan ehelkoodii inay soo noqdaan.

وَقَالَ لِفِتْيَٰنِهِ ٱجْعَلُوا۟ بِضَٰعَتَهُمْ فِى رِحَالِهِمْ لَعَلَّهُمْ يَعْرِفُونَهَآ إِذَا ٱنقَلَبُوٓا۟ إِلَىٰٓ أَهْلِهِمْ لَعَلَّهُمْ يَرْجِعُونَ ﴿٦٢﴾

Alle wuxuu makaniyey Nabi Yuusuf dhulkii Masar siduu doono oo wanaagana u maamuli, naxariista Alle na way gaadhaa cidduu doono, wanaagna Alle ma dayaco, ajirka aakhiraase u khayr roon kuwa xaqa rumeeyey ee dhawrsada, markaas ka dib waxaa Nabi Yuusuf ugu yimid socdaal walaalihiis oos garan iyaguse ayan garanayn, markuu u dhammeeyey rarkoodii iyo alaabtay rabeenna wuxuu ka doonay inay u keenaan walaalkooda aabbe, haddayna keeninna ayan ku soo noqonayn, iyagoo arka inuu u oofiyey miisidda ixtiraamayna, waxayna sheegeen inay aabbahood ka dalbi doonaan arrintaas, wuxuuna faray in badeecadday la yimaadeen loo dhexgaliyo rarka si ay u aqoonsadaan inaan waxba laga qaadan una soo noqdaan.

Suddi wuxuu sheegay: in la wariyey in Nabi Yuusuf warsaday waxay rabeen, aabahood, dalkay ka yimideen, intay yihiin iyo kii u yaraaye ku halaagsamay baadiye kii bahooda ahaana aabihiis la hadhay aadna u jecel yahay, wuxuuna ugu jeclaa kii yaraa, markaasuu faray in la dhaqaaleeyo lana ixtiraamo. **[Yuusuf: 56-62].**

63. Kolkay u noqdeen aabahood waxay dhaheen aabaw waa naloo diiday beegidda (hadda kadib haduuna walaalkood raacin)

فَلَمَّا رَجَعُوٓا۟ إِلَىٰٓ أَبِيهِمْ قَالُوا۟ يَٰٓأَبَانَا مُنِعَ مِنَّا ٱلْكَيْلُ فَأَرْسِلْ مَعَنَآ أَخَانَا نَكْتَلْ وَإِنَّا لَهُۥ لَحَٰفِظُونَ ﴿٦٣﴾

ee nala dir walaalkanno aan miisannee annaguna waanu ilaalin isagee.

قَالَ هَلۡ ءَامَنُكُمۡ عَلَيۡهِ إِلَّا كَمَآ أَمِنتُكُمۡ عَلَىٰٓ أَخِيهِ مِن قَبۡلُۖ فَٱللَّهُ خَيۡرٌ حَٰفِظٗاۖ وَهُوَ أَرۡحَمُ ٱلرَّٰحِمِينَ ٦٤

64. Wuxuuna yidhi miyaan idinku aamini karaa sidaan idiinku aaminay walaalkiis horay mooyee, Alle ayaa u khayrroon dhawre waana naxariis badane.

وَلَمَّا فَتَحُواْ مَتَٰعَهُمۡ وَجَدُواْ بِضَٰعَتَهُمۡ رُدَّتۡ إِلَيۡهِمۡۖ قَالُواْ يَٰٓأَبَانَا مَا نَبۡغِيۖ هَٰذِهِۦ بِضَٰعَتُنَا رُدَّتۡ إِلَيۡنَاۖ وَنَمِيرُ أَهۡلَنَا وَنَحۡفَظُ أَخَانَا وَنَزۡدَادُ كَيۡلَ بَعِيرٖۖ ذَٰلِكَ كَيۡلٞ يَسِيرٞ ٦٥

65. Markay fureen alaabtoodii waxay ka heleen badeecadoodii oo loo soo celiyay, waxayna dhaheen aabow maxaan rabnaa tani waa badeecadeenii oo laynoo soo celiyay waxaannu u shaharsanaynaa (oo raashin u soo iibsanaynaa) ehelkeenna waxaan ilaalinaynaa walaalkanno waxaana kororsanaynaa miisid riti taasina waa beegid sahlan.

قَالَ لَنۡ أُرۡسِلَهُۥ مَعَكُمۡ حَتَّىٰ تُؤۡتُونِ مَوۡثِقٗا مِّنَ ٱللَّهِ لَتَأۡتُنَّنِي بِهِۦٓ إِلَّآ أَن يُحَاطَ بِكُمۡۖ فَلَمَّآ ءَاتَوۡهُ مَوۡثِقَهُمۡ قَالَ ٱللَّهُ عَلَىٰ مَا نَقُولُ وَكِيلٞ ٦٦

66. Wuxuuna yidhi (Yacquub) idinla diri maayo intaad ballan Alle iga siisaan inaad ii keenaysaan wiilka in laydin koobo mooyee, markay siiyeen ballankiina wuxuu yidhi Ilaahay waxaynu sheegi waa u wakiil shaahida.

Way noqdeen waxayna aabahood u sheegeen in hadda ka dib loo diidi beegidda iyo inay ka soo masagaystaan dhulka Masar hadayna walaalkood wadin, waxayna ka codsadeen inuu la diro si ay isagana u ilaaliyaan riti badar ah oo saa'id ahna u helaan, wuuse shakiyay oo ka cabsaday in sidii Yuusuf ku dhacdo, waxayna arkeen badeecadoodii oo loo soo celiyay, waxayna dhaheen aabaw maxaa inaga maqan waatan badeecadeenii waa laynoo soo celiyay, waana soo badaraysanaynaa walaalkanan waanu dhawri waxaanu kororsan riti wuxuuse yidhi idinla diri maayo inaad ballan adag ii qaadaan mooyee inaad igu soo celinaysaan markay ballan qaadeenna wuxuu yidhi Alle ayaa u wakiila hadalkeenna.

Ibnu Isxaaq wuxuu yidhi: wuxuu saas u yeelay waxaa lagama maarmaana inay masagaystaan. Taasina waxay ku tusin in la digtoonaado Alle na lagu xidhnaado oo wanaag la sugo. **[Yuusuf: 63-66].**

وَقَالَ يَٰبَنِيَّ لَا تَدۡخُلُواْ مِنۢ بَابٖ وَٰحِدٖ وَٱدۡخُلُواْ مِنۡ أَبۡوَٰبٖ مُّتَفَرِّقَةٖۖ وَمَآ أُغۡنِي عَنكُم مِّنَ ٱللَّهِ مِن شَيۡءٍۖ إِنِ ٱلۡحُكۡمُ إِلَّا لِلَّهِۖ عَلَيۡهِ تَوَكَّلۡتُۖ وَعَلَيۡهِ فَلۡيَتَوَكَّلِ ٱلۡمُتَوَكِّلُونَ ٦٧

67. Wuxuu yidhi wiilashaydow ha ka galina (magaalada) irrid kaliya ee ka gala irido kala tagsan, waxna idiinkama tarayo xagga Alle, amarka cidaan Alle ahayn ma leh, isagaan talo saartay isaga uun ha talo saarteen kuwa wax talo saaran.

وَلَمَّا دَخَلُواْ مِنۡ حَيۡثُ أَمَرَهُمۡ أَبُوهُم مَّا كَانَ يُغۡنِي عَنۡهُم مِّنَ ٱللَّهِ مِن شَيۡءٍ إِلَّا حَاجَةٗ فِي نَفۡسِ يَعۡقُوبَ قَضَىٰهَاۚ وَإِنَّهُۥ لَذُو عِلۡمٖ لِّمَا عَلَّمۡنَٰهُ وَلَٰكِنَّ أَكۡثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يَعۡلَمُونَ ٦٨

68. Markay ka galeen meeshuu faray aabahood ma ahayn wax Alle xaggiisa wax uga tari ee waxay ahayd dan nafta (Nabi) Yacquub ku sugnayd oo uu gutay, isaguna wuxuu ahaa mid cilmi leh wixii aan barray sababteed, dadka badankiise wax ma oga.

وَلَمَّا دَخَلُواْ عَلَىٰ يُوسُفَ ءَاوَىٰٓ إِلَيۡهِ أَخَاهُۖ قَالَ إِنِّيٓ أَنَا۠ أَخُوكَ فَلَا تَبۡتَئِسۡ بِمَا كَانُواْ يَعۡمَلُونَ ٦٩

69. Markay u galeen Yuusuf wuxuu dhaweeyay walaalkiis wuxuuna ku yidhi anigu walaalkaa baan ahay ee haka murugoon waxay faleen.

فَلَمَّا جَهَّزَهُم بِجَهَازِهِمۡ جَعَلَ ٱلسِّقَايَةَ فِي رَحۡلِ أَخِيهِ ثُمَّ أَذَّنَ مُؤَذِّنٌ أَيَّتُهَا ٱلۡعِيرُ إِنَّكُمۡ لَسَٰرِقُونَ ٧٠

70. Markuu darbay safarkoodii wuxuu yeelay galaaskii walaalkii rarkiisa, markaas waxaa dhawaaqay mid dhawaaqi safaryahaw tuugaad tihiin.

قَالُواْ وَأَقۡبَلُواْ عَلَيۡهِم مَّاذَا تَفۡقِدُونَ ٧١

71. Waxayna dhaheen intay soo qaabileen maxaad waydeen.

قَالُواْ نَفۡقِدُ صُوَاعَ ٱلۡمَلِكِ وَلِمَن جَآءَ بِهِۦ حِمۡلُ بَعِيرٖ وَأَنَا۠ بِهِۦ زَعِيمٞ ٧٢

72. Waxayna dhaheen saacii xaakimka ciddii keentana wuxuu yeelan rar riti anaana kafiil u ah.

Nabi Yacquub wuxuu ugu naseexeeyay wiilashiisa inay ka galaan magaalada irrido kala duwan, amarkana Alle ayaa iska leh ee waa uun dadaal, Alle ayaana kan la talo saarto ah, markay meeshii tageen waxay faleen siduu aabahood faray inkastoon amarka Alle cidna wax ka tarayn, waxayse ahayd arrin Nabi Yacquub doonay wuxuuna ahaa mid Alle cilmi baray, dad badan baanse ogayn. Markay magaaladii galeen wuxuu soo dhaweeyay walaalkii isuna sheegay inuu walaalkii yahay murugoonna, waxaana la sameeyay si lagu soo reebo oo galaaskii boqorka yaa alaabtiisa la dhex galiyay, waxaana loogu dhawaaqay safar yahaw tuugaad tihiin, markay warsadeen waxa la waayayna waxaa loo sheegay in la waayay galaaskii boqorka ciddii keentana ay heli rar riti oo ujuura ah xaalkana Alle ayaa iska leh isagaana maamula, waxaana waajiba in la rumeeyo xaqa laguna waano qaato qisooyinka. **[Yuusuf: 67-72].**

قَالُواْ تَٱللَّهِ لَقَدۡ عَلِمۡتُم مَّا جِئۡنَا لِنُفۡسِدَ فِي ٱلۡأَرۡضِ وَمَا كُنَّا سَٰرِقِينَ ٧٣

73. Waxayna dheheen Alle Ayaan ku dhaarannaye waad ogtihiin inaannaan u imaannin inaan fasaadinno dhulka tuugana aannaan ahayn.

قَالُواْ فَمَا جَزَٰٓؤُهُۥٓ إِن كُنتُمۡ كَٰذِبِينَ ٧٤

74. Waxayna dheheen (qoomkii Yuusuf) waa maxay abaalkiisu haddaad been sheegaysaan.

قَالُواْ جَزَٰٓؤُهُۥ مَن وُجِدَ فِي رَحۡلِهِۦ فَهُوَ جَزَٰٓؤُهُۥۚ كَذَٰلِكَ نَجۡزِي ٱلظَّٰلِمِينَ ٧٥

75. Waxay dheheen abaalkiisu waa ruuxa laga helo rarkiisa, saasaana ku abaal marinnaa daalimiinta.

فَبَدَأَ بِأَوۡعِيَتِهِمۡ قَبۡلَ وِعَآءِ أَخِيهِ ثُمَّ ٱسۡتَخۡرَجَهَا مِن وِعَآءِ أَخِيهِۚ كَذَٰلِكَ كِدۡنَا لِيُوسُفَۖ مَا كَانَ لِيَأۡخُذَ أَخَاهُ فِي دِينِ ٱلۡمَلِكِ إِلَّآ أَن يَشَآءَ ٱللَّهُۚ نَرۡفَعُ دَرَجَٰتٖ مَّن نَّشَآءُۗ وَفَوۡقَ كُلِّ ذِي عِلۡمٍ عَلِيمٞ ٧٦

76. Wuxuuna ka billaabay (fatashihii Yuusuf) alaabtoodii walaalkii alaabtiisa ka hor markaasuu ka soo bixiyey weelkii walaalkiis, saasaana u baray kaydkaas Yuusuf mana ahayn mid ku qaadan kara walaalkiis diinta boqorka in Alle doono mooyee, waxaan kor yeelnaa darajada ciddaan doonno, mid kastoo cilmi lehna waxaa ka sarreeya cilmi badane (Alle).

Waxay ku dhaarteen Yuusuf walaalihiis inaanay u iman inay fasaadiyaan dhulka tuugona ahayn iyagoo run sheegi, waxaase la warsaday abaalka cidii laga helo, waxayna sheegeen in isaga loo qaadan, markaasaa la fatashay alaabtoodii laguna billaabay kuwii kale kadibna laga soo saaray Yuusuf walaalkiis, waana arrin Alle baray Yuusuf si uu walaalkiis ula soo hadho, mana suurawdeen inuu kula soo hadho diinta boqorka dhulkaas Masar, wuxuu Alle doonase waa gaar, Alle na wuxuu kor yeelaa cidduu doono darajadiisa, cid kastoo cilmi lehna waxaa kasii sarreeya mid ka cilmi badan intuu cilmigu kaga dhammaado Alle.

Ibnu Cabbaas iyo Xasan Basari waxa laga wariyay: mid cilmi badanba mid kalaa ka sarreeya intuu cilmigu kaga dhamaado Alle. Aayaduhuna waxay tusin siday run u sheegeen Yuusuf walaalihiis iyo sida Alle Yuusuf u baray siduu walaalkiis ula soo hadhi lahaa iyo inaan cidina cilmi ku faani karin iyo in Alle cidduu doono darajeeyo, oo ah dadka toosan ee xaqa ku socda. **[Yuusuf: 73-76].**

77. Waxayna dheheen (Yuusuf walaalihiis) hadduu xaday waxaa xaday mar hore walaalkiis, markaasuu Yuusuf u qarsaday naftiisa oosan u muujin. Wuxuuna yidhi idinkaa ka shar badan Alle na waa og yahay waxaad sheegeeysaan.

٧٧ ۞ قَالُوٓاْ إِن يَسۡرِقۡ فَقَدۡ سَرَقَ أَخٞ لَّهُۥ مِن قَبۡلُۚ فَأَسَرَّهَا يُوسُفُ فِي نَفۡسِهِۦ وَلَمۡ يُبۡدِهَا لَهُمۡۚ قَالَ أَنتُمۡ شَرّٞ مَّكَانٗاۖ وَٱللَّهُ أَعۡلَمُ بِمَا تَصِفُونَ ٧٧

78. Waxayna dheheen wasiirow wuxuu leeyahay (wiilku) aabbo wayn oo oday ah ee qaado midkanno badalkiisa waxaan kugu aragnaa samo falee.

٧٨ قَالُواْ يَٰٓأَيُّهَا ٱلۡعَزِيزُ إِنَّ لَهُۥٓ أَبٗا شَيۡخٗا كَبِيرٗا فَخُذۡ أَحَدَنَا مَكَانَهُۥٓۖ إِنَّا نَرَىٰكَ مِنَ ٱلۡمُحۡسِنِينَ ٧٨

79. Wuxuuna yidhi magan Alle inaan qaadanno midkaan ka hellay alaabtannadii agtiisa mooyee, markaas daalimiin baan noqonaynaa.

٧٩ قَالَ مَعَاذَ ٱللَّهِ أَن نَّأۡخُذَ إِلَّا مَن وَجَدۡنَا مَتَٰعَنَا عِندَهُۥٓ إِنَّآ إِذٗا لَّظَٰلِمُونَ ٧٩

80. Markay ka quusteen yey kaliyoobeen iyagoo faqi, wuxuuna yidhi kii u waynaa waad ogtihiin in aabbihiin ballan adag idinka qaaday iyo inaad horay ugu xadgudubteen Yuusuf

٨٠ فَلَمَّا ٱسۡتَيۡـَٔسُواْ مِنۡهُ خَلَصُواْ نَجِيّٗاۖ قَالَ كَبِيرُهُمۡ أَلَمۡ تَعۡلَمُوٓاْ أَنَّ أَبَاكُمۡ قَدۡ أَخَذَ عَلَيۡكُم مَّوۡثِقٗا مِّنَ ٱللَّهِ وَمِن قَبۡلُ مَا فَرَّطتُمۡ فِي يُوسُفَۖ فَلَنۡ أَبۡرَحَ ٱلۡأَرۡضَ

anugu dhulkan kama tagayo inta aabbahay iga idmi ama Alle i xukumi isagaa xukun fiicane.

حَتَّىٰ يَأۡذَنَ لِيٓ أَبِيٓ أَوۡ يَحۡكُمَ ٱللَّهُ لِي ۖ وَهُوَ خَيۡرُ ٱلۡحَٰكِمِينَ ﴿٨٠﴾

Nabi Yuusuf Alle ayaa dhawray illeen Nabi buu ahaaye, sida Alle u dhawray Nabiyada dhamaantood, saas darteed wax ma bi'inin sey sheegeen in hadduu kani wax xaday-waxna ma xadine- walaalkiis yaa horay wax u xaday, Nabi Yuusufna hoos hoos yuu ugu jawaabay inay iyagu ka liitaan, markii walaalkiis la soo reebay yey cawdeen ooy sheegeen aabbihiis inuu oday gaboobay yahay oyna codsan in midkood lagu badalo waase laga diiday illeen ujeedadaa ahayd in la reebee, markay quusteenna way faqeen, wuxuuna u soo jeediyey kii u waynaa inay noqdaan iyagoo xusuusan waxay horay Yuusuf ugu faleen ballanna ay ka qaadeen inay kanna soo celin wuxuu u sheegay inuusan tagayn inta aabbihii ka idmi ama Alle xukun fiican siin oo ah soo daynta wiilka.

Taasina waxay ku tusin in waxa qarsoon Alle kaliya og yahay tasarrufkana isagu iska leeyahay, wixii bannaan oo la fali karana la sameeyo markaas xaalka isaga loo bandhigo. **[Yuusuf: 77-80].**

81. Wuxuuna ku yidhi ku noqda aabbihiin waxaadna dhahdaan aabbow wiilkaagii wuu xaday, mana furaynno waxaan ogaannay mooyee, mana nihin kuwo waxa maqan ilaaliya (og).

ٱرۡجِعُوٓاْ إِلَىٰٓ أَبِيكُمۡ فَقُولُواْ يَٰٓأَبَانَآ إِنَّ ٱبۡنَكَ سَرَقَ وَمَا شَهِدۡنَآ إِلَّا بِمَا عَلِمۡنَا وَمَا كُنَّا لِلۡغَيۡبِ حَٰفِظِينَ ﴿٨١﴾

82. Waydiina magaaladaan joognay iyo safarkaan la soo noqonnay annaguna run baannu sheegi.

وَسۡـَٔلِ ٱلۡقَرۡيَةَ ٱلَّتِي كُنَّا فِيهَا وَٱلۡعِيرَ ٱلَّتِيٓ أَقۡبَلۡنَا فِيهَا ۖ وَإِنَّا لَصَٰدِقُونَ ﴿٨٢﴾

83. Wuxuuna yidhi saas ma aha ee waxay idiin qurxisay naftiinnu arrin (xaalkayguse) waa samir fiican wuxuu u dhaw yahay Alle inuu ii keeno dhammaan illeen isagaa oge falsan ehe.

قَالَ بَلۡ سَوَّلَتۡ لَكُمۡ أَنفُسُكُمۡ أَمۡرٗاۖ فَصَبۡرٞ جَمِيلٌۖ عَسَى ٱللَّهُ أَن يَأۡتِيَنِي بِهِمۡ جَمِيعًاۚ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلۡعَلِيمُ ٱلۡحَكِيمُ ﴿٨٣﴾

84. Wuuna iskaga jeedsaday xaggooda wuxuuna yidhi walbahaarkay Yuusufow, waxayna la caddaadeen indhihiisu walbahaar wuxuuna noqday mid aad u tiiraanyeysan.

وَتَوَلَّىٰ عَنۡهُمۡ وَقَالَ يَٰٓأَسَفَىٰ عَلَىٰ يُوسُفَ وَٱبۡيَضَّتۡ عَيۡنَاهُ مِنَ ٱلۡحُزۡنِ فَهُوَ كَظِيمٞ ﴿٨٤﴾

قَالُواْ تَٱللَّهِ تَفْتَؤُاْ تَذْكُرُ يُوسُفَ حَتَّىٰ تَكُونَ حَرَضًا أَوْ تَكُونَ مِنَ ٱلْهَٰلِكِينَ ﴿٨٥﴾

85. Waxayna dheheen dhaar Allee ma daynaysid sheegidda Yuusuf intaad ka tabar gabtid ama ka halaagsantid.

قَالَ إِنَّمَآ أَشْكُواْ بَثِّى وَحُزْنِىٓ إِلَى ٱللَّهِ وَأَعْلَمُ مِنَ ٱللَّهِ مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿٨٦﴾

86. Wuxuuna yidhi waxaan uun u sheegan xusnigayga iyo walbahaarkayga Alle, waxaana ka ogahay xagga Alle waxaydaan ogayn.

Way noqdeen waxayna uga warrameen aabahood xaalkii iyo waxay indhahooda ku arkeen aynase waxa qarsoon ogayn, runbayna sheegeen sidii u muuqatay, aabbahoodse wuu ka aamin baxay oo ku tuhmay inay ku faleen siday horay Yuusuf ugu faleen wuxuuna Alle ka rajeeyey inuu dhammaan u keeno, inkastoo indhuhu la cadaadeen walbahaar, mase falin wax reeban illeen wuu uun walbahaaray waana arrin daran dhabtii, waxayse ugu sii dareen inay dhahaan Yuusuf magaciisa dayn maysid intaad ka jilicdo ama ka dhimatid, wuxuuse u sheegay inuu Alle uun u caban ogyahayna waxayna ogayn, taasina waxay ku tusin in Alle lagu kalsoonaado farajna laga sugo isagoo wixii la karo la fali. **[Yuusuf: 81-86].**

يَٰبَنِىَّ ٱذْهَبُواْ فَتَحَسَّسُواْ مِن يُوسُفَ وَأَخِيهِ وَلَا تَاْيْـَٔسُواْ مِن رَّوْحِ ٱللَّهِ ۖ إِنَّهُۥ لَا يَاْيْـَٔسُ مِن رَّوْحِ ٱللَّهِ إِلَّا ٱلْقَوْمُ ٱلْكَٰفِرُونَ ﴿٨٧﴾

87. (Wuxuu yidhi Yacquub) wiilashayow taga oo soo daydaya (warkii) Yuusuf iyo walaalkiis hana ka quusanina naxariista Alle (farajkiisa) kama quusto farajka Alle qoom gaala ah mooyee.

فَلَمَّا دَخَلُواْ عَلَيْهِ قَالُواْ يَٰٓأَيُّهَا ٱلْعَزِيزُ مَسَّنَا وَأَهْلَنَا ٱلضُّرُّ وَجِئْنَا بِبِضَٰعَةٍ مُّزْجَىٰةٍ فَأَوْفِ لَنَا ٱلْكَيْلَ وَتَصَدَّقْ عَلَيْنَآ ۖ إِنَّ ٱللَّهَ يَجْزِى ٱلْمُتَصَدِّقِينَ ﴿٨٨﴾

88. Markay u soo galeen Yuusuf waxay dheheen wasiiryahow waxaa na taabtay annaga iyo ehelkannagaba dhib waxaana la nimid badeeco liidata ee noo oofi dhammee beegidda nuguna sadaqayso Ilaahay wuxuu abaal mariyaa kuwa sadaqaystee.

قَالَ هَلۡ عَلِمۡتُم مَّا فَعَلۡتُم بِيُوسُفَ وَأَخِيهِ إِذۡ أَنتُمۡ جَٰهِلُونَ ﴿٨٩﴾

89. Wuxuuna ku yidhi ma ogtihiin waxaad ku fasheen Yuusuf iyo walaalkiis idinkoo jaahiliina.

قَالُوٓاْ أَءِنَّكَ لَأَنتَ يُوسُفُۖ قَالَ أَنَا۠ يُوسُفُ وَهَٰذَآ أَخِيۖ قَدۡ مَنَّ ٱللَّهُ عَلَيۡنَآۖ إِنَّهُۥ مَن يَتَّقِ وَيَصۡبِرۡ فَإِنَّ ٱللَّهَ لَا يُضِيعُ أَجۡرَ ٱلۡمُحۡسِنِينَ ﴿٩٠﴾

90. Waxayna dheheen oo adugu ma Yuusuf baa tahay wuxuu yidhi anugu Yuusuf baan ahay kanna waa walaalkay Alle ayaa nagu mannaystay (kulmin) illeen ciddii ka dhawrsata Alle oo samirta Alle ma dayaco ajirka samofalayaashee.

قَالُواْ تَٱللَّهِ لَقَدۡ ءَاثَرَكَ ٱللَّهُ عَلَيۡنَا وَإِن كُنَّا لَخَٰطِـِٔينَ ﴿٩١﴾

91. Waxay dheheen dhaar Alle ee waxaa naga kaa doortay Alle waana gafsanayn.

قَالَ لَا تَثۡرِيبَ عَلَيۡكُمُ ٱلۡيَوۡمَۖ يَغۡفِرُ ٱللَّهُ لَكُمۡۖ وَهُوَ أَرۡحَمُ ٱلرَّٰحِمِينَ ﴿٩٢﴾

92. Wuxuuna yidhi canaani korkiinna ma aha maanta, Alle ha idiin dambi dhaafo isagaa naxariis badane.

Nabi Yacquub wuxuu faray wiilashiisii inay noqdaan soona warsadaan Yuusuf iyo walaalkiis oyna ka quusannin farajka Alle, illeen gaalaa ka quusatee, markay noqdeen way ku calaacaleen in dhibaato hayso badeeca liidatana ay wataan waxay ka codsadeen in loo samo falo loona masaggeeyo, markaas waxaa hadlay Yuusuf oo warsaday waxay ku faleen Yuusuf iyo walaalkiis waxayna warsadeen inuu Yuusuf yahay, wuxuuna ugu jawaabay inuu Yuusuf yahay kanna walaalkiis yahay, Alle na u samo falay illeen ciddii Alle caabudda oo samirta Alle ma dayacee, markaasay ku calaacaleen in Alle ka doortay oyna gafsanaayeen, Yuusufse wuu iska saamaxay ugana dambi dhaaf dalbay Alle una sheegay inaan canaanu maanta saarrayn, taasina waa caddaaladda Alle iyo awooddiisa iyo naxariista Alle iyo fadligiisa iyo inuusan dayacayn mu'mininta caabudda oo samir iyo adkaysi la timaadda, tan kale waxay ku tusin naxariis, isu turid, dhibaato ka fududayn, isa saamixid iyo isuducayn. Waanataas akhlaaq iyo wanaag iyo kala aarasho la'aan iyo in Alle yahay meesha khayrku ka yimaaddo. **[Yuusuf: 87-92].**

ٱذۡهَبُواْ بِقَمِيصِي هَٰذَا فَأَلۡقُوهُ عَلَىٰ وَجۡهِ أَبِي يَأۡتِ بَصِيرٗا وَأۡتُونِي بِأَهۡلِكُمۡ أَجۡمَعِينَ ﴿٩٣﴾

93. La taga qamiiskaygan kuna tuura wajiga aabbahay ha noqdo mid wax arkee iina keena ehelkiinna dhammaan.

وَلَمَّا فَصَلَتِ ٱلْعِيرُ قَالَ أَبُوهُمْ إِنِّى لَأَجِدُ رِيحَ يُوسُفَ ۖ لَوْلَآ أَن تُفَنِّدُونِ ﴿٩٤﴾

94. Markuu safarkii soo baxay wuxuu yidhi aabbahood: anugu waxaan heli Yuusuf dabayshiisii «caraftiisii» haddaydaan i dhaliilayn.

قَالُوا۟ تَٱللَّهِ إِنَّكَ لَفِى ضَلَٰلِكَ ٱلْقَدِيمِ ﴿٩٥﴾

95. Waxayna dheheen adugu wali waxaad ku sugan tahay gafkii hore, (jacaylkii Yuusuf).

فَلَمَّآ أَن جَآءَ ٱلْبَشِيرُ أَلْقَىٰهُ عَلَىٰ وَجْهِهِۦ فَٱرْتَدَّ بَصِيرًا ۖ قَالَ أَلَمْ أَقُل لَّكُمْ إِنِّىٓ أَعْلَمُ مِنَ ٱللَّهِ مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿٩٦﴾

96. Markuu yimid kii bishaaraynayey wuxuu ku tuuray (qamiiskii) wajigiisa wuxuuna noqday mid wax arka, wuxuuna yidhi miyaanan idinku dhihin anugu waxaan ka ogahay xagga Alle waxaydaan ogayn.

قَالُوا۟ يَٰٓأَبَانَا ٱسْتَغْفِرْ لَنَا ذُنُوبَنَآ إِنَّا كُنَّا خَٰطِـِٔينَ ﴿٩٧﴾

97. Waxayna dheheen: aaboow nooga dhaafid warso dambigannaga waan gafsanayne.

قَالَ سَوْفَ أَسْتَغْفِرُ لَكُمْ رَبِّىٓ ۖ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلْغَفُورُ ٱلرَّحِيمُ ﴿٩٨﴾

98. Wuxuuna yidhi waan idiinka dambi dhaaf warsan doonaa Rabbigay isagaa dambi dhaafe naxariista ehe.

Wuxuu faray Yuusuf inay sii qaadaan qamiiskiisa kuna tuuraan wajiga aabihiis inuu wax arko, dadkiina u keenaan, Yacquubna wuxuu Alle gaadhsiiyey dabayshii Yuusuf, wuxuuna u sheegay dadkii isagoo ka yaabi inay ku sheegaan cantatab iyo isku darsan, waxayna ku sheegeen inuu wali ku sugan yahay jacaylkii Yuusuf ee darnaa, markaas waxaa u yimid kii bishaaraynayey wuxuuna qamiiskii ku tuuray wajiga aabbihiis waxna wuu arkay, markaasuu ku yidhi miyaanan idin dhihin waxaan ka ogahay xagga Alle waxaydaan ogayn, waxayna qirteen gafkoodii waxayna warsadeen aabbaahood inuu u dambi dhaaf warsado, wuxuuna u sheegay inuu u dambi dhaaf dalbi doono.

Ibnu Mascuud wuxuu yidhi: wuxuu dib ugu dhigay tan iyo aroortii (oo ducada la aqbalo), saasayna u dhabowday yididiiladii Nabi Yacquub, Allena ka fayday dhibkii hayay muddo dheer, taasina waxay ku tusin awoodda Alle iyo inuu u gargaaro addoomadiisa suubban, kana faydo kurbada markay dhab u rumeeyaan. **[Yuusuf: 93-98].**

فَلَمَّا دَخَلُواْ عَلَىٰ يُوسُفَ ءَاوَىٰٓ إِلَيۡهِ أَبَوَيۡهِ وَقَالَ ٱدۡخُلُواْ مِصۡرَ إِن شَآءَ ٱللَّهُ ءَامِنِينَ ﴿٩٩﴾

99. Markay u galeen Yuusuf wuxuu isu dumay labadiisii waalid, wuxuuna yidhi gala Masar Alle hadduu doono idinkoo aammina.

وَرَفَعَ أَبَوَيۡهِ عَلَى ٱلۡعَرۡشِ وَخَرُّواْ لَهُۥ سُجَّدٗاۖ وَقَالَ يَٰٓأَبَتِ هَٰذَا تَأۡوِيلُ رُءۡيَٰيَ مِن قَبۡلُ قَدۡ جَعَلَهَا رَبِّي حَقّٗاۖ وَقَدۡ أَحۡسَنَ بِيٓ إِذۡ أَخۡرَجَنِي مِنَ ٱلسِّجۡنِ وَجَآءَ بِكُم مِّنَ ٱلۡبَدۡوِ مِنۢ بَعۡدِ أَن نَّزَغَ ٱلشَّيۡطَٰنُ بَيۡنِي وَبَيۡنَ إِخۡوَتِيٓۚ إِنَّ رَبِّي لَطِيفٞ لِّمَا يَشَآءُۚ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلۡعَلِيمُ ٱلۡحَكِيمُ ﴿١٠٠﴾

100. Wuxuuna u koryeelay labada waalid kursigii, waxayna ula hoobteen sujuud «salaan», wuxuuna yidhi: aabbow waatan fasirkii riyadaydii horay, wuxuu ka yeelay Rabbigay xaq (sugan) wuuna ii wanaag falay markuu iga soo bixiyay xabbiska idinkana keenay baadiyaha kadib intuu shaydaan fasaadiyay ani iyo walaalahay dhexdannada, Rabbigayna waa u turaha wuxuu doono waana oge falsan.

رَبِّ قَدۡ ءَاتَيۡتَنِي مِنَ ٱلۡمُلۡكِ وَعَلَّمۡتَنِي مِن تَأۡوِيلِ ٱلۡأَحَادِيثِۚ فَاطِرَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ أَنتَ وَلِيِّۦ فِي ٱلدُّنۡيَا وَٱلۡأٓخِرَةِۖ تَوَفَّنِي مُسۡلِمٗا وَأَلۡحِقۡنِي بِٱلصَّٰلِحِينَ ﴿١٠١﴾

101. Allow waxaad i siisay xukun waxaadna i bartay fasiraadda riyada, Allaha abuuray samooyinka iyo dhulkow adaa wali (gargaare) ii ah aduun iyo aakhiroba ee i oofso anoo muslim ah ina haleeshii kuwa suubban.

Alle ayaa wayn awoodna leh, xaqiijiyayna riyadii Nabi Yuusuf dadkiisiina u soo kulmiyay xabbis iyo dhibaato ka dib iyo fasaadin shaydaan isaga iyo walaalihiis dhexdooda, illeen Alle waa u turaha u naxariis badan cidduu doono, waana wax walba oge falsan, markaasuu Nabi Yuusuf u jeedsaday xagga Alle xusayna nimcada Alle siiyay wuxuuna ka baryay Allaha awoodda leh ee cirka iyo dhulka abuuray ee gargaaraha u ah adduun iyo aakhiraba inuu ku dilo muslinnimo haleeshiiyana kuwii suubbanaa.

Aayaduhuna waxay tusin in Alle faydo dhibka iyo cidhiidhiga, suu u kulmiyo wax kala tagsan, in nicmo adduun ayan waarayn, in Alle yahay gargaaraha mu'mininta, in la warsado khaatimo fiican iyo ku dilid diinta islaamka, iyo inuu wehel uga yeelo dadkii suubbanaa. Waxayna ku tusin in marka xaal taam noqdo ku xigi nuqsaan oo adduun lagu waarayn, ruuxa caqliga badanna uu xusuusnaado xaalkii Nabi Yuusuf iyo xukunkiisii iyo siduu Alle uga baryay khaatimo fiican, Alle ha nagu khatimo khaatimo fiican. **[Yuusuf: 99-101].**

ذَٰلِكَ مِنْ أَنۢبَآءِ ٱلْغَيْبِ نُوحِيهِ إِلَيْكَ ۖ وَمَا كُنتَ لَدَيْهِمْ إِذْ أَجْمَعُوٓا۟ أَمْرَهُمْ وَهُمْ يَمْكُرُونَ ﴿١٠٢﴾

102. Kaasi waa wararka wax maqan annagaana kuu waxyoon, mana aadan ahayn agtooda markay kulmiyeen amarkoodii iyagoo shirqooli.

وَمَآ أَكْثَرُ ٱلنَّاسِ وَلَوْ حَرَصْتَ بِمُؤْمِنِينَ ﴿١٠٣﴾

103. Dadka badankiisna ma rumaynayaan aad kuba dadaashide.

وَمَا تَسْـَٔلُهُمْ عَلَيْهِ مِنْ أَجْرٍ ۚ إِنْ هُوَ إِلَّا ذِكْرٌ لِّلْعَٰلَمِينَ ﴿١٠٤﴾

104. Wax ujuura ahna kama warsanaysid (xaqa) waa uun waanada caalamka.

وَكَأَيِّن مِّنْ ءَايَةٍ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ يَمُرُّونَ عَلَيْهَا وَهُمْ عَنْهَا مُعْرِضُونَ ﴿١٠٥﴾

105. Badanaa calaamad samooyinka iyo dhulka oo ay marayaan iyagoo ka jeedsan.

وَمَا يُؤْمِنُ أَكْثَرُهُم بِٱللَّهِ إِلَّا وَهُم مُّشْرِكُونَ ﴿١٠٦﴾

106. Mana rumaynayaan badankoodu Alle iyagoo la wadaajin mooyee.

أَفَأَمِنُوٓا۟ أَن تَأْتِيَهُمْ غَٰشِيَةٌ مِّنْ عَذَابِ ٱللَّهِ أَوْ تَأْتِيَهُمُ ٱلسَّاعَةُ بَغْتَةً وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ ﴿١٠٧﴾

107. Ma waxay ka aammin noqdeen inay u timaado masiibo cadaabka Alle ama ugu timaado saacaddu kado iyogoo ogayn.

قُلْ هَٰذِهِۦ سَبِيلِىٓ أَدْعُوٓا۟ إِلَى ٱللَّهِ ۚ عَلَىٰ بَصِيرَةٍ أَنَا۠ وَمَنِ ٱتَّبَعَنِى ۖ وَسُبْحَٰنَ ٱللَّهِ وَمَآ أَنَا۠ مِنَ ٱلْمُشْرِكِينَ ﴿١٠٨﴾

108. Dheh tan waa waddadayda (xaqa ah) waxaana ugu yeedhi (dadka) xagga Alle anoo ku sugan xujo cad aniga iyo inta i

raacda, waxaana nasahay Alle, kamidna ma ihi mushrikiinta.

Waxaa la soo sheegay oo qisada Yuusuf ah waa wax maqnaa oo Alle u waxyooday Nabiga, mana la joogin markay u kulmayeen dhagarta, dadka badankiina si kastoo loogu dadaalo ma rumeeyo xaqa, Nabiguna wax ujuura ah ma warsanayn gaadhsiinta xaqa, ee quraanku waa waanada caalamka, waxaana badan intay marayaan calaamado cirka iyo dhulka ayna ku waano qaadanayn ee ay iska mari kana jeedsadaan, wax badan oo ka midana waxay isku daraan rumayn Alle iyo la wadaajis cibaadadiisa.

Wax habboonna ma aha in Alle wax kale, wuxuu dooni ha ahaadee, wax lala wadaajiyo, sida baryada, wax tarka, kaalmaha iwm, illeen aammin lagama aha inay masiibo timaado ama saacaddu kado ugu timaado dadka, tan kale diintu waa caddahay waana jidka xaqa, een qallooc lahayn, Nabiga iyo inta raacdayna way ku hanuuniyaan dadka iyagoo ku cilmi leh oo toosan, kana fog jidka gaalada, waana in xaqa la rumeeyo, looguna yeedho dadka si cad oo wanaag iyo asluub ku dheehan tahay oo loo cilmi leeyahay xaqa. **[Yuusuf: 102-108].**

وَمَآ أَرۡسَلۡنَا مِن قَبۡلِكَ إِلَّا رِجَالٗا نُّوحِيٓ إِلَيۡهِم مِّنۡ أَهۡلِ ٱلۡقُرَىٰٓۗ أَفَلَمۡ يَسِيرُواْ فِي ٱلۡأَرۡضِ فَيَنظُرُواْ كَيۡفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلَّذِينَ مِن قَبۡلِهِمۡۗ وَلَدَارُ ٱلۡأٓخِرَةِ خَيۡرٞ لِّلَّذِينَ ٱتَّقَواْۗ أَفَلَا تَعۡقِلُونَ ١٠٩

109. Ma ahayn kuwii aan diray hortaa waxaan rag loo waxyoodo ahayn oo ehelka magaalooyinka ah, miyayna soconnin dhulka oo ay fiiriyaan siday noqotay cidhibta kuwii ka horreeyay, daarta aakhiro yaana u khayr roon kuwii dhawrsaday ee miyaydaan kasayn.

حَتَّىٰٓ إِذَا ٱسۡتَيۡـَٔسَ ٱلرُّسُلُ وَظَنُّوٓاْ أَنَّهُمۡ قَدۡ كُذِبُواْ جَآءَهُمۡ نَصۡرُنَا فَنُجِّيَ مَن نَّشَآءُۖ وَلَا يُرَدُّ بَأۡسُنَا عَنِ ٱلۡقَوۡمِ ٱلۡمُجۡرِمِينَ ١١٠

110. Markay quusteen rasuulladii una maleeyeen in loo sheegay been waxaa u yimid gargaarkannaga waxaana la koriyay ciddaan doonno lagamana celiyo ciqaabtannada qoomka danbiilayaasha ah.

111. Waxaa ugu sugan qisadooda waano kuwa caqliga leh, mana aha sheeko la been abuurtay waase u rumayn wixii ka horreeyay (oo kutubtii xaqa ahayda) iyo caddaynta wax kasta iyo hanuunka iyo naxariista ciddii rumayn xaqa.

لَقَدْ كَانَ فِي قَصَصِهِمْ عِبْرَةٌ لِّأُولِي
ٱلْأَلْبَٰبِ ۗ مَا كَانَ حَدِيثًا يُفْتَرَىٰ
وَلَٰكِن تَصْدِيقَ ٱلَّذِي بَيْنَ يَدَيْهِ
وَتَفْصِيلَ كُلِّ شَيْءٍ وَهُدًى وَرَحْمَةً لِّقَوْمٍ
يُؤْمِنُونَ ﴿١١١﴾

Alle wuxuu diray Nabi Maxamed hortiisa (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) rasuullo loo waxyooday, ee dadku waa inay dhulka maraan ee waano qaataan siday noqotay cidhibtii kuwii hore aakhiraana u khayr roon kuwa dhawrsada, tan kale markay rasuulladii ka quusteen rumaynta qoomkoodii oo la beeniyay yaa waxaa u imaanayay gargaarkii Alle, markaasuu korinaayey cidda uu doono, wax ciqaabta Alle kuwa danbiilayaasha ah ka celinna ma jiro, qisooyinkaa la soo sheegayna waanaa ugu sugan ciddii caqli leh, mana aha war la iska been abuuray, waase u rumayn xaqii ka horreeyay, iyo caddaynta wax kasta iyo hanuunka iyo naxariista ciddii rumayn xaqa. Saasayna ku dhammaatay suuraddii iyadoo kulmisay wax badan oo qisadii Nabi Yuusuf iyo xigmooyin kalaba, waxaase waajiba in lagu waano qaato siday suuraduba ku dhammaatay, lana rumeeyo xaqa, Alle na loo kali yeelo cibaadada, lana sugo gargaarka Alle, lana ogaado xaqnimada quraanka, wanaagga iyo xaqana loogu yeedho dadka, guud ahaan Alle si dhaba loo rumeeyo. **[Yuusuf: 109-111].**

Suurat Ar-Racd

سُورَةُ الرَّعۡدِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Xarfaha hore oo kale waan soo sheegnay fasirkooda, kuwaasna waa aayaadkii kitaabka (quraanka), waxa lagaaga soo dejiyay xagga Allehaa waa xaq, dadka badankiise ma rumaynin.

الٓمٓرۚ تِلۡكَ ءَايَٰتُ ٱلۡكِتَٰبِۗ وَٱلَّذِيٓ أُنزِلَ إِلَيۡكَ مِن رَّبِّكَ ٱلۡحَقُّ وَلَٰكِنَّ أَكۡثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يُؤۡمِنُونَ ١

2. Alle waa kan kor yeela samooyinka tiir la'aan aad aragtaan markaas ka kor noqday carshiga, (si u cunanta), sakhirayna qorraxda iyo dayaxa dhammaanna waxay ku socdaan muddo magacaaban, Alle ayaa maamula amarka caddeeyana aayaadka inaad la kulanka Allihiin yaqiinsataan.

ٱللَّهُ ٱلَّذِي رَفَعَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ بِغَيۡرِ عَمَدٖ تَرَوۡنَهَاۖ ثُمَّ ٱسۡتَوَىٰ عَلَى ٱلۡعَرۡشِۖ وَسَخَّرَ ٱلشَّمۡسَ وَٱلۡقَمَرَۖ كُلّٞ يَجۡرِي لِأَجَلٖ مُّسَمّٗىۚ يُدَبِّرُ ٱلۡأَمۡرَ يُفَصِّلُ ٱلۡأٓيَٰتِ لَعَلَّكُم بِلِقَآءِ رَبِّكُمۡ تُوقِنُونَ ٢

3. Alle waa kan fidiyay dhulka yeelayna dhexdiisa buuro, iyo wabiyo midho kastana ka yeelay dhexdiisa laba nooc wuxuuna ku dadaa habeenkii maalinta, arrintaasna calaamooyin yaa ugu sugan ciddii fikiri.

وَهُوَ ٱلَّذِي مَدَّ ٱلۡأَرۡضَ وَجَعَلَ فِيهَا رَوَٰسِيَ وَأَنۡهَٰرٗاۖ وَمِن كُلِّ ٱلثَّمَرَٰتِ جَعَلَ فِيهَا زَوۡجَيۡنِ ٱثۡنَيۡنِۖ يُغۡشِي ٱلَّيۡلَ ٱلنَّهَارَۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَأٓيَٰتٖ لِّقَوۡمٖ يَتَفَكَّرُونَ ٣

Suuradaha lagu billaabay xarfahaas oo kale waxay ku tusin sida Alle quraanka ugu gargaaray iyo xaqa iyo waynida quraanka, aayadahanna waxay ku tusin in quraanku xaq Alle soo dejiyay yahay, inkastoo dadka badankii rumaynin, Ilaaha quraanka soo dejiyayna waa kan kor yeelay samooyinka tiir la'aantiis.

Kana kor noqday carshiga si u cunanta, hallayn la'aan iyo u ekaynsiin la'aan, sahlayna qorraxda iyo dayaxa, muddo ay ku socdaanna u yeelay, amarkana isagaa maamula, caddeeyana aayaadka inaad la kulanka Ilaahiinna rumaysaan, waana kan dhulka fidiyay, buuro, wabiyo, iyo nooc kastoo midha ahna yeelay, habeenka iyo maalintana isku badala si ay calaamo ugu noqoto ciddii fikiri. Taasina waxay ku tusin in Alle maamulo adduunka sare iyo hoosaba, awooddiisuna wax la qiyaasi karo ahayn, mudanna cibaado dhaba iyo aqoonsi. **[Ar-Racd: 1-3].**

وَفِي ٱلۡأَرۡضِ قِطَعٞ مُّتَجَٰوِرَٰتٞ وَجَنَّٰتٞ مِّنۡ أَعۡنَٰبٖ وَزَرۡعٞ وَنَخِيلٞ صِنۡوَانٞ وَغَيۡرُ صِنۡوَانٖ يُسۡقَىٰ بِمَآءٖ وَٰحِدٖ وَنُفَضِّلُ بَعۡضَهَا عَلَىٰ بَعۡضٖ فِي ٱلۡأُكُلِۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَأٓيَٰتٖ لِّقَوۡمٖ يَعۡقِلُونَ ٤

4. Dhulka waxaa ah goosinno daris ah (isku dhaw) iyo beero cinaba, iyo beer iyo timir oo mataano ah iyo kuwo aan mataano ahayn, laguna waraabiyo biyo kaliya waxaana ku kala fadilaynaa (wanaajinaynaa) qaar qaarka kale cunnada (dhadhanka), arrintaasna calaamaa ugu sugan ciddii wax kasi.

* وَإِن تَعۡجَبۡ فَعَجَبٞ قَوۡلُهُمۡ أَءِذَا كُنَّا تُرَٰبًا أَءِنَّا لَفِي خَلۡقٖ جَدِيدٍۗ أُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ بِرَبِّهِمۡۖ وَأُوْلَٰٓئِكَ ٱلۡأَغۡلَٰلُ فِيٓ أَعۡنَاقِهِمۡۖ وَأُوْلَٰٓئِكَ أَصۡحَٰبُ ٱلنَّارِۖ هُمۡ فِيهَا خَٰلِدُونَ ٥

5. Haddaad yaabtana waxaa yaaba hadalkoodii ahaa ma markaan noqonno carro yaa markaas abuur cusub (nala abuuri), kuwaasi waa kuwa ka gaaloobay Rabbigood, waana kuwa luquntooda la yeelay katiinado waana kuwo naarta ehelkeeda ah kuna dhex waari.

وَيَسۡتَعۡجِلُونَكَ بِٱلسَّيِّئَةِ قَبۡلَ ٱلۡحَسَنَةِ وَقَدۡ خَلَتۡ مِن قَبۡلِهِمُ ٱلۡمَثُلَٰتُۗ وَإِنَّ رَبَّكَ لَذُو مَغۡفِرَةٖ لِّلنَّاسِ عَلَىٰ ظُلۡمِهِمۡۖ وَإِنَّ رَبَّكَ لَشَدِيدُ ٱلۡعِقَابِ ٦

6. Waxayna kaa dedejisan xumaan wanaag ka hor iyadooy tagtay hortood tusaalayaal (ciqaabeed) Rabbigaana waa u dambi dhaafaha dadka iyagoo dulmi ku sugan Rabbigaana waa ciqaab darane.

Aayaduhuna waxay ka warrami qudrada Alle iyo awooddiisa iyo midhaha isu dhaw ee biyo kaliya ka waraaba hadana kala duwan yahay dhadhankoodu, midabkoodu, adaygga, jileeca, waynida, yaraanta, waxaasoo dhanna waxay ku tusin awoodda iyo maamulka Alle ay ku waano qaadan ciddii wax kasi, yaan Ilaahay ahayn oo saas yeeli kara, aaway kuwii caqli xumaa ee lahaa dabeecad baa wax fasha, waa la yaab waxaase la yaab isna ah inay gaaladu cuslaystaan in markay dhintaan oy carro noqdaan la soo celin markale, kuwaasu waa kuwa Alle ka gaaloobay ee luqunta laga xidhi waana kuwo ku waari, ee dadajista ciqaab iyo dhibaato wanaag ka hor, hortoodana waxaa ahaa wax lagu waano qaato oo ciqaaba, Allese wuu isaga danbi dhafaa iyagoo dulmi fali, ciqaabtiisuna way daran tahay. Rasuulkana (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) waxaa laga weriyay: saamaxa Alle la'aantii iyo dhaafiddiisu cidna nolol kuma xasisheen, ciqaabtiisuna hadayna jirin cid kasta way talo saaran lahayd. Waxaa wariyay Ibnu Abii Xaatim, saas darteed waa in la waano qaato wanaaggana lagu dadaalo, xaaraantana laga fagaado. **[Ar-Racd: 4-6].**

وَيَقُولُ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لَوۡلَآ أُنزِلَ عَلَيۡهِ ءَايَةٞ مِّن رَّبِّهِۦٓۚ إِنَّمَآ أَنتَ مُنذِرٞۖ وَلِكُلِّ قَوۡمٍ هَادٖ ٧

7. Waxay dheheen kuwii gaaloobay maxaa loogu soo dejin waayey korkiisa aayad xagga Allehiis ka timid, adugu waxaad uun tahay dige cid kastana waxay leedahay hanuuniye.

ٱللَّهُ يَعۡلَمُ مَا تَحۡمِلُ كُلُّ أُنثَىٰ وَمَا تَغِيضُ ٱلۡأَرۡحَامُ وَمَا تَزۡدَادُۖ وَكُلُّ شَيۡءٍ عِندَهُۥ بِمِقۡدَارٍ ٨

8. Alle ayaa og waxay ku siddo uurka dhaddig kasta, iyo waxay ilmo galeennadu nusqaamin, iyo waxay kordhin (dhicis iyo shin) wax kastana Alle agtiisa qaddar (waqti) yuu leeyahay.

عَٰلِمُ ٱلۡغَيۡبِ وَٱلشَّهَٰدَةِ ٱلۡكَبِيرُ ٱلۡمُتَعَالِ ٩

9. Wuxuuna og yahay waxa maqan iyo waxa jooga waana weyne ka sarreeya (wax kasta).

سَوَآءٞ مِّنكُم مَّنۡ أَسَرَّ ٱلۡقَوۡلَ وَمَن جَهَرَ بِهِۦ وَمَنۡ هُوَ مُسۡتَخۡفِۭ بِٱلَّيۡلِ وَسَارِبُۢ بِٱلنَّهَارِ ١٠

10. Waana isku mid kiinna qarsada hadalka iyo kiinna la qaylya, iyo kii isqariya hebeenkii iyo kii muuqda maalintii.

لَهُۥ مُعَقِّبَٰتٌ مِّنۢ بَيْنِ يَدَيْهِ وَمِنْ خَلْفِهِۦ يَحْفَظُونَهُۥ مِنْ أَمْرِ ٱللَّهِ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُغَيِّرُ مَا بِقَوْمٍ حَتَّىٰ يُغَيِّرُوا۟ مَا بِأَنفُسِهِمْ ۗ وَإِذَآ أَرَادَ ٱللَّهُ بِقَوْمٍ سُوٓءًا فَلَا مَرَدَّ لَهُۥ ۚ وَمَا لَهُم مِّن دُونِهِۦ مِن وَالٍ ﴿١١﴾

11. Wuxuuna leeyahay (ruux kasta) kuwo isbedela (malaa'ig) oo hortiisa iyo gadaashiisa ah kuna dhawra amarka Alle, Ilaahayna ma dooriyo wax dad ku sugan yahay intay ka dooriyaan waxa naftooda ku sugan, markuu Alle la doono dad dhibna wax ka celin ma jiro, mana laha Alle ka sokow gargaare.

Waxbadan yey gaaladii warsadeen aayado kibir iyo isla wayni darteed, Nabiguse waa uun u dige, cidkastana waxay leedahay hanuuniye. Tan kale Alle ayaa wax walba og, waxa uurka ku jira, waxa dhicis noqon waxa shin ku dhalan, wax walbana waqti bay ku leeyihiin Alle agtiisa, wuuna og yahay waxa maqan iyo waxa jooga, waana waynaha sarreeya, waana isugu mid Alle ciddii wax qarsata iyo tii habeen la gabata iyo tii maalin muujisata, ruux walbana malaa'igbaa hortiisa iyo gadaashiisa ku dhawrta idinka Alle, sunnada Alle na waa inaan cidna laga doorinin siday ku sugan tahay haddayna doorinin waxa naftooda ku sugan cidduu Alle xumaan la doonana wax ka celin ama gargaari ma jiro.

Waxaana sugnaaday in malaa'igtu isukeen beddesho habeen iyo maalin, saasayna u habboon tahay in xumaanta laga dhawrsado wanaaggana lagu dadaalo, Alle na la cuskado. **[Ar-Racd: 7-11].**

هُوَ ٱلَّذِى يُرِيكُمُ ٱلْبَرْقَ خَوْفًا وَطَمَعًا وَيُنشِئُ ٱلسَّحَابَ ٱلثِّقَالَ ﴿١٢﴾

12. Alle waa kan idin tusiya hillaaca cabsi gelin iyo rajo gelin darteed, wuxuuna abuuraa daruurta culus.

وَيُسَبِّحُ ٱلرَّعْدُ بِحَمْدِهِۦ وَٱلْمَلَٰٓئِكَةُ مِنْ خِيفَتِهِۦ وَيُرْسِلُ ٱلصَّوَٰعِقَ فَيُصِيبُ بِهَا مَن يَشَآءُ وَهُمْ يُجَٰدِلُونَ فِى ٱللَّهِ وَهُوَ شَدِيدُ ٱلْمِحَالِ ﴿١٣﴾

13. Wuuna tasbiixsadaa onkadku isagoo mahadda Alle ku dheehan iyo malaa'igtuna (waxay la tasbiixsan) cabsida Alle, wuxuuna diraa danabyo wuxuuna ku ridaa cidduu doono, iyaguna waxay ku murmi Alle isagoo ciqaabtiisu daran tahay.

لَهُۥ دَعۡوَةُ ٱلۡحَقِّۖ وَٱلَّذِينَ يَدۡعُونَ مِن دُونِهِۦ لَا يَسۡتَجِيبُونَ لَهُم بِشَيۡءٍ إِلَّا كَبَٰسِطِ كَفَّيۡهِ إِلَى ٱلۡمَآءِ لِيَبۡلُغَ فَاهُ وَمَا هُوَ بِبَٰلِغِهِۦۚ وَمَا دُعَآءُ ٱلۡكَٰفِرِينَ إِلَّا فِي ضَلَٰلٖ ١٤

14. Alle waxaa u sugnaaday baryo (iyo cibaado) xaqa, waxa ka soo hadhayna waxba uma ajiibaan (kuwa baryi) sida mid ku fidiyey gacmihiisa xagga biyaha inay afkiisa gaadhaan, mana gaadhayaan, baryada gaaladuna waxaan baadi ahayn ma aha.

وَلِلَّهِ يَسۡجُدُ مَن فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ طَوۡعٗا وَكَرۡهٗا وَظِلَٰلُهُم بِٱلۡغُدُوِّ وَٱلۡأٓصَالِ ١٥

15. Waxaa Ilaahay u sujuuda «u khuduuca» waxa ku sugan samooyinka iyo dhulka ogolaansho iyo qasab iyo hooskooda aroor iyo galbihiiba.

Alle waa kan awoodda badan ee dadka tusiya hillaac cabsi gelin iyo damac galin, abuurana daruur culus, lana tasbiixsado onkadku iyo malaa'igtu dartiis, dirana danabyada cidduu doonana ku rida, gaaladuna waxay ku murmi Alle isagoo ciqaabtiisu daran tahay, Alle na wuxuu mudan yahay cibaado xaq ah isagaana baryo mudan, waxay baryi Alle ka sokowna waxay la mid yihiin ruux gacmaha biyaha ku taagay inay soo gaadhaan afkiisa mana suurowdo, gaalada baryadeeduna waa baadi wax kama jiraana, waxa cirka iyo dhulka ku suganna Alle ayay u khuduucaan ogolaansho iyo qasabba oo cid abuurid, doorsoon, cudur, geeri iyo maamulka Alle diidi karta ma jirto. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: haddaad maqashaan onkodka Alle xusa, kuma dhoco cid Alle xusiye, waxaa wariyey dhabaraani. Dhabtuna waa in Alle xaq yahay, Nabiguna xaq yahay, diintuna xaq tahay, qiyaamo iyo xisaab iyo janno iyo naarna wax sugan yihiin lana rabo darbasho iyo samo fal. **[Ar-Racd: 12-15].**

قُلۡ مَن رَّبُّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ قُلِ ٱللَّهُۚ قُلۡ أَفَٱتَّخَذۡتُم مِّن دُونِهِۦٓ أَوۡلِيَآءَ لَا يَمۡلِكُونَ لِأَنفُسِهِمۡ نَفۡعٗا وَلَا ضَرّٗاۚ قُلۡ هَلۡ يَسۡتَوِي ٱلۡأَعۡمَىٰ وَٱلۡبَصِيرُ أَمۡ هَلۡ تَسۡتَوِي ٱلظُّلُمَٰتُ وَٱلنُّورُۗ أَمۡ جَعَلُواْ لِلَّهِ شُرَكَآءَ خَلَقُواْ كَخَلۡقِهِۦ فَتَشَٰبَهَ ٱلۡخَلۡقُ عَلَيۡهِمۡۚ قُلِ ٱللَّهُ خَٰلِقُ كُلِّ شَيۡءٖ وَهُوَ ٱلۡوَٰحِدُ ٱلۡقَهَّٰرُ ١٦

16. Waxaad dhahdaa yaa ah Rabbiga (abuuray maamulana) samooyinka iyo dhulka, waxaadna dhahdaa waa Alle, waxaadna dhahdaa ma yeelanaysaan Alle ka sokow awliyo (gargaarayaal) oon u hananayn naftooda nacfi iyo dhib midna, dheh ma eg yihiin indhoole iyo wax arke, mase eg yihiin mugdiyo iyo nuur, mise waxay u yeeleen Alle shuruko

wax u abuuray sida abuurka Alle oo waxaa isaga ekaaday abuurkii, waxaad dhahdaa Alle ayaa wax kasta abuuray waana kali awood badan.

17. Wuxuu ka soo dejiyey samada biyo waxaana la durduray waadiyo awooddood wuxuuna xambaartaa daadku daadxoor sarraysa, waxay dabka ku huriyaanna doonid isku qurxin, ama alaabo waxaa ah abuur la mida, saasuuna Alle ugu yeelaa tusaale xaqa iyo baadilka, xumbaduse way tagi iyadoo ingagan waxa dadka anficise wuxuu ku nagaan dhulka, saasuuna Alle u yeelaa tusaalayaasha.

أَنزَلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَسَالَتْ أَوْدِيَةٌۢ
بِقَدَرِهَا فَٱحْتَمَلَ ٱلسَّيْلُ زَبَدًا رَّابِيًا ۖ
وَمِمَّا يُوقِدُونَ عَلَيْهِ فِى ٱلنَّارِ ٱبْتِغَآءَ
حِلْيَةٍ أَوْ مَتَٰعٍ زَبَدٌ مِّثْلُهُۥ ۚ كَذَٰلِكَ
يَضْرِبُ ٱللَّهُ ٱلْحَقَّ وَٱلْبَٰطِلَ ۚ فَأَمَّا ٱلزَّبَدُ
فَيَذْهَبُ جُفَآءً ۖ وَأَمَّا مَا يَنفَعُ ٱلنَّاسَ
فَيَمْكُثُ فِى ٱلْأَرْضِ ۚ كَذَٰلِكَ يَضْرِبُ ٱللَّهُ
ٱلْأَمْثَالَ ﴿١٧﴾

Alle mooyee Ilaah kale oo xaq lagu caabudo ma jiro, cirka, dhulka iyo khalqiga dhammaanna Alle ayaa ahaysiiyey, mana mudna cid kale in wax lala wadaajiyo, illeen waxba ma hantaane, mana sinna mu'min iyo gaal, sidayna u sinnayn indhoole iyo wax arke, iyo mugdi iyo iftiin, wax abuura Alle oo kalena ma jiro, Rabbi ayaase wax kasta abuuray, waana kali awood badan, isagaana roobka keena togoggana durduriya iyagoo xambaarsan xumbo sarreysa, sida xumbada birta, saasuuna Alle ugu yeelaa tusaale xaqa iyo baadhilka, xumbaduse way tagtaa iyadoo ingagan waxa dadka anficise dhulkuu ku hadhaa, saasuuna Alle wax u tusaaleeyaa, arrintaasuna waxay ku tusin in Alle Ilaaha xaqa yahay, inayna sinnayn mu'min iyo gaal, mugdi iyo nuur, in roobka Alle keeno, in xumaantu baabi'i xaquna sugnaan, waana tusaale caddeyn sida kala bixi maalinta qiyaame iyo aakharo. «Allaha sahlo». **[Ar-Racd: 16-17].**

18. Kuwa Rabbigood ajiibay (maqlay) waxaa u sugnaaday wanaag (janno) kuwaan ajiibin (maqlinna) hadduu u sugnaado waxa dhulka ku sugan dhammaan oo wax la mida la jiro way isku furan lahaayeen kuwaasna waxaa u sugnaaday

لِلَّذِينَ ٱسْتَجَابُوا۟ لِرَبِّهِمُ ٱلْحُسْنَىٰ ۚ وَٱلَّذِينَ
لَمْ يَسْتَجِيبُوا۟ لَهُۥ لَوْ أَنَّ لَهُم مَّا فِى
ٱلْأَرْضِ جَمِيعًا وَمِثْلَهُۥ مَعَهُۥ لَٱفْتَدَوْا۟
بِهِۦٓ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ لَهُمْ سُوٓءُ ٱلْحِسَابِ
وَمَأْوَىٰهُمْ جَهَنَّمُ ۖ وَبِئْسَ ٱلْمِهَادُ ﴿١٨﴾

xisaab xun (daran) hooygooduna waa jahannamo iyadaana u xun gogol.

19. Cid og in waxa lagaaga soo dejiyey xagga Allehaa uu xaq yahay ma la mid baa mid indho la', waxaa uun waantooma kuwa caqliga leh.

* أَفَمَن يَعْلَمُ أَنَّمَآ أُنزِلَ إِلَيْكَ مِن رَّبِّكَ ٱلْحَقُّ كَمَنْ هُوَ أَعْمَىٰٓ ۚ إِنَّمَا يَتَذَكَّرُ أُو۟لُوا۟ ٱلْأَلْبَٰبِ ﴿١٩﴾

20. Ee ah kuwa oofiya ballanka Alle oon burininna ballanka adag.

ٱلَّذِينَ يُوفُونَ بِعَهْدِ ٱللَّهِ وَلَا يَنقُضُونَ ٱلْمِيثَٰقَ ﴿٢٠﴾

21. Ee ah kuwa xidhiidhiya waxa Alle faray in la xidhiidhiyo kana cabsada Rabbigood kana cabsada xisaab xun.

وَٱلَّذِينَ يَصِلُونَ مَآ أَمَرَ ٱللَّهُ بِهِۦٓ أَن يُوصَلَ وَيَخْشَوْنَ رَبَّهُمْ وَيَخَافُونَ سُوٓءَ ٱلْحِسَابِ ﴿٢١﴾

22. Ee ah kuwa u samray doonid wajiga Rabbigood dartiis, oogayna salaadda, kana bixiyey waxaan ku arzaaqnay qayb qarsoodi iyo muuqaalba, kuna difaaca xumaanta lagula kaco wanaag, kuwaas cidhib fiican yaa u sugnaatay.

وَٱلَّذِينَ صَبَرُا۟ ٱبْتِغَآءَ وَجْهِ رَبِّهِمْ وَأَقَامُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ وَأَنفَقُوا۟ مِمَّا رَزَقْنَٰهُمْ سِرًّا وَعَلَانِيَةً وَيَدْرَءُونَ بِٱلْحَسَنَةِ ٱلسَّيِّئَةَ أُو۟لَٰٓئِكَ لَهُمْ عُقْبَى ٱلدَّارِ ﴿٢٢﴾

23. Waxaana gali jannada cadnin iyaga iyo cidda suuban oo aabbayaalkooda, haweenkooda iyo caruurtooda, malaa'igtuna waxay uga soo gali irid kasta.

جَنَّٰتُ عَدْنٍ يَدْخُلُونَهَا وَمَن صَلَحَ مِنْ ءَابَآئِهِمْ وَأَزْوَٰجِهِمْ وَذُرِّيَّٰتِهِمْ ۖ وَٱلْمَلَٰٓئِكَةُ يَدْخُلُونَ عَلَيْهِم مِّن كُلِّ بَابٍ ﴿٢٣﴾

24. Iyagoo ku dhihi nabadgalyo korkiinna ha ahaato samirkiinna dartiis waxaa wanaag badan cidhibta daarta (janno).

سَلَٰمٌ عَلَيْكُم بِمَا صَبَرْتُمْ ۚ فَنِعْمَ عُقْبَى ٱلدَّارِ ﴿٢٤﴾

Wanaag fale wanaag iyo jannaa u sugnaaday illeen Alle ayuu maqlaye, kuwaan Alle maqlinna waxa dhulka ku sugan hadday leeyihiin dhammaan iyo wax la mida way isku furan lahaayeen qiyaamada, waxaana u sugnaaday xisaab xun

iyo hooy cadaab, mana sinna cid og xaqnimada quraanka iyo cid ka indho la' waanaduna waxay anfacdaa kuwa caqliga leh ee oofiya cahdiga iyo ballanka Alle, ee xidhiidhiya waxa Alle faray in la xidhiidhiyo oo qaraabo iyo dadka dhibaataysan iyo xaqa Alle, xisaab xunna ka yaaba, ee samra oo u adkaysta cibaadada dar Alle, oogana salaadda waxna bixiya qarsoodi iyo muuqba, waana kuwa cidhib fiican iyo jannada cadnin u sugnaatay iyaga iyo ehelkooda wanaagsan, malaa'igtuna meel walba way uga soo geli iyadoo salaami uguna bogaadin cidhibta fiican, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: kooxda jannada u hor gali waa fuqarada kuwii dar Alle u hijrooday, ilaaliya xuduudda dhulka islaamka, oo dhibka la isaga dhigo, oo dadka ka xigsada, dhintana midkood isagoo dantiisii laabta ku haysta waxna uusan ka qaban karin. Waxaa wariyey imaam Axmed. **[Ar-Racd: 18-24].**

وَٱلَّذِينَ يَنقُضُونَ عَهۡدَ ٱللَّهِ مِنۢ بَعۡدِ مِيثَٰقِهِۦ وَيَقۡطَعُونَ مَآ أَمَرَ ٱللَّهُ بِهِۦٓ أَن يُوصَلَ وَيُفۡسِدُونَ فِي ٱلۡأَرۡضِ أُوْلَٰٓئِكَ لَهُمُ ٱللَّعۡنَةُ وَلَهُمۡ سُوٓءُ ٱلدَّارِ ﴿٢٥﴾

25. Kuwa buriya ballanka Alle adkayntiisa ka dib gooyana wuxuu faray Alle in la xidhiidhiyo oo fasaadiyana dhulka kuwaas waxaa u sugnaaday lacnad iyo guri xun.

ٱللَّهُ يَبۡسُطُ ٱلرِّزۡقَ لِمَن يَشَآءُ وَيَقۡدِرُۚ وَفَرِحُواْ بِٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَا وَمَا ٱلۡحَيَوٰةُ ٱلدُّنۡيَا فِي ٱلۡأٓخِرَةِ إِلَّا مَتَٰعٞ ﴿٢٦﴾

26. Alle ayaana u fidiya rizqiga cidduu doono kuna cidhiidhya (cidduu doono), waxayna ku farxeen gaaladii nolosha adduunyo, mana aha nolosha adduunyo aakharo agteeda waxaan maalmo lagu raaxaysto ahayn.

وَيَقُولُ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لَوۡلَآ أُنزِلَ عَلَيۡهِ ءَايَةٞ مِّن رَّبِّهِۦۚ قُلۡ إِنَّ ٱللَّهَ يُضِلُّ مَن يَشَآءُ وَيَهۡدِيٓ إِلَيۡهِ مَنۡ أَنَابَ ﴿٢٧﴾

27. Waxay dhihi kuwii gaaloobay maxaa loogu soo dejin waayey korkiisa aayad Rabbigiisa xaggiisa, waxaad dhahdaa Alle wuu dhumiyaa cidduu doono (oo xaqa diidda) wuxuuna u hanuuniyaa xaggiisa ciddii u noqota.

ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَتَطۡمَئِنُّ قُلُوبُهُم بِذِكۡرِ ٱللَّهِۗ أَلَا بِذِكۡرِ ٱللَّهِ تَطۡمَئِنُّ ٱلۡقُلُوبُ ﴿٢٨﴾

28. Ee ah kuwa rumeeyey xaqa kuna xasishay quluubtoodu xuska Alle, xuska Alle ayayna ku xasishaa quluubtu.

29. Ee ah kuwa rumeeyey xaqa falayna camal suuban waxaana u sugnaaday khayr iyo nicmo iyo noqosho wanaagsan.

ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ طُوبَىٰ لَهُمْ وَحُسْنُ مَـَٔابٍ ﴿٢٩﴾

Aayadda hore kuwa ku xusan waa kuwa ka soo horjeeda mu'miniinta ee buriya ballanka gooyana wuxuu faray in la xidhiidhiyo Alle, dhulkana fasaadiya oo xumaan iyo gaalnimo iyo dulmi ku maamula, kuwaas lacnad iyo guri xun baana u sugnaaday, awooddana Alle ayaa iska leh oo cidduu doonana, imtixaan ugu waasiciya, kuu doono wax kaafiya siiya ama ku cidhiidhya, mana aha jeceyl iyo nacayb midna, gaalana waxay ku farxaan adduunyada, nolosha adduunyana markii loo eego aakharo iyo waxa Alle u darbay mu'miniinta waa maalmo raaxo leh ee tegi, waxaana xadiith ku sugnaaday: adduunyadu markii loo eego aakharo waa far bad la geliyey, bal ha eego wuxuu ka soo celiyey. Waxaa wariyey «Muslim». Gaalana mucjiso doonid iyo madax adayg waa caadadood, ciddiise xaqa diida Alle ayaa sii dhumiya, tii hanuunka doontana wuu hanuuniyaa, ee qalbigeedu ku xasisho xuska Alle, xusidda Alle ayaana quluubtu ku xasishaa, kuwaa xaqa rumeeyey ee camal fiican fala waxay heli janno iyo noqosho fiican, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: jannada waxaa ah geed uu socdo kan saaran hooskeed boqol sano oosan goynayn. Waxaa wariyey Bukhaari. Wakaas xaqa Alle iyo awooddiisa, iyo xaalka adduun iyo kan aakhiro iyo wax qalbigu ku xasilo iyo janno iyo wanaag iyo hanuun iyo baadi ciddii caqli lahna way kala dooran. **[Ar-Racd: 25-29].**

30. Saasaan kuugu dirray ummad ay tageen ummado hortood inaad ku akhrido kaan kuu waxyoonnay iyaguna waxay ka gaaloobi Allaha Raxmaana, waxaad dhahdaa isagaa rabbigay ah, ku xaq lugu caabudo oon isaga ahaynna majiro isagaana tala saartay xagiisaana u noqon.

كَذَٰلِكَ أَرْسَلْنَٰكَ فِىٓ أُمَّةٍ قَدْ خَلَتْ مِن قَبْلِهَآ أُمَمٌ لِّتَتْلُوَا۟ عَلَيْهِمُ ٱلَّذِىٓ أَوْحَيْنَآ إِلَيْكَ وَهُمْ يَكْفُرُونَ بِٱلرَّحْمَٰنِ ۚ قُلْ هُوَ رَبِّى لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ عَلَيْهِ تَوَكَّلْتُ وَإِلَيْهِ مَتَابِ ﴿٣٠﴾

31. Haddii quraan dartiis buuro lala kaxayn, ama lala goyn dhulka ama lagula hadli dadkii dhintay (wuxuu noqon lahaa quraankan), amarkase Alle ayaa dhammaantiis iska leh, miyeyanse ogayn kuwa rumeeyey xaqu hadduu Alle doono

وَلَوْ أَنَّ قُرْءَانًا سُيِّرَتْ بِهِ ٱلْجِبَالُ أَوْ قُطِّعَتْ بِهِ ٱلْأَرْضُ أَوْ كُلِّمَ بِهِ ٱلْمَوْتَىٰ ۗ بَل لِّلَّهِ ٱلْأَمْرُ جَمِيعًا ۗ أَفَلَمْ يَاْيْـَٔسِ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ أَن لَّوْ يَشَآءُ ٱللَّهُ لَهَدَى ٱلنَّاسَ جَمِيعًا ۗ وَلَا يَزَالُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟

تُصِيبُهُم بِمَا صَنَعُواْ قَارِعَةٌ أَوۡ تَحُلُّ قَرِيبٗا مِّن دَارِهِمۡ حَتَّىٰ يَأۡتِيَ وَعۡدُ ٱللَّهِۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُخۡلِفُ ٱلۡمِيعَادَ ٣١

inuu hanuunin lahaa dadka dhammaan, kamana tagaan kuwii gaaloobay (xumaan) intay kaga dhacdo musiibo waxay faleen darteed ama degto meel ku dhaw guryahooda intuu ka yimaaddo yaboohii Alle, Ilaah ma baajiyo ballanka.

وَلَقَدِ ٱسۡتُهۡزِئَ بِرُسُلٖ مِّن قَبۡلِكَ فَأَمۡلَيۡتُ لِلَّذِينَ كَفَرُواْ ثُمَّ أَخَذۡتُهُمۡۖ فَكَيۡفَ كَانَ عِقَابِ ٣٢

32. Waxaa lagu jees jeesay rasuullo kaa horreeyey markaasaan u sugay kuwii gaaloobay, ka dibna waan qabtay, ee siday noqotay ciqaabtaydii (way darrayd).

Alle wuxuu sheegay Nabiga inuu u diray ummad ay ka horreeyeen ummado rasuullo loo diray, si aad ugu akhrido waxa laguu waxyooday, waxayna ka gaaloobi Allaha Raxmaan, waxaad dhahdaa waa Rabbigay, ilaah xaq lugu caabudo ma jiro isaga mooyee, isagaanan talo saartay xaggiisaana u noqon, u toobad keeni, Alle na isagoo ammaani quraanka wuxuu sheegay in haddii kutubihii hore laga heli kitaab buuraha meeshooda ka kaxeeya ama dhulka lala gooyo, ama dadkii dhintay lagula hadlo waxaa ka mudnaan lahaa quraankan, amarka Alle ayaa dhammaantiis iska leh, miyeynase ogayn kuwii rumeeyey in hadduu Alle doono hanuunin lahaa dadka dhammaan, gaalana kama tagaan xumaanta inta ay kaga dhacdo musiibo, ama ay ku dhacdo meesha u dhaw guryahooda intuu ka yimaado yaboohii Alle oo ah guusha islaamka, ama qiyaamada, Alle na ma baajiyo ballanka. Waxaa lagu jees jeesay rasuullo kaa horreeyey waxaana u sugay gaaladii markaasaan qabtay ee siday tahay ciqaabtaydii. Aayaduhuna waxay caddayn rasuulnimada Nabiga, kalinimada Alle, talasaarashadiisa, in isaga loo noqon, fadliga iyo sharafta quraanka, madax adaygga gaalada, in la ciqaabi Alle na oofin ballanka. **[Ar-Racd: 30-32].**

أَفَمَنۡ هُوَ قَآئِمٌ عَلَىٰ كُلِّ نَفۡسِۭ بِمَا كَسَبَتۡۗ وَجَعَلُواْ لِلَّهِ شُرَكَآءَ قُلۡ سَمُّوهُمۡۚ أَمۡ تُنَبِّـُٔونَهُۥ بِمَا لَا يَعۡلَمُ فِي ٱلۡأَرۡضِ أَم بِظَٰهِرٖ مِّنَ ٱلۡقَوۡلِۗ بَلۡ زُيِّنَ لِلَّذِينَ كَفَرُواْ مَكۡرُهُمۡ وَصُدُّواْ عَنِ ٱلسَّبِيلِۗ وَمَن يُضۡلِلِ ٱللَّهُ فَمَا لَهُۥ مِنۡ هَادٖ ٣٣

33. Cid ku ilaalin naf kastaa waxay kasbatay (Alle) ma la mid baa midaan saas ahayn, waxayna u yeeleen Alle shurako dheh magacaaba, mise waxaad Alle uga warramaysaan waxaan joogin dhulka, mise hadal muuqaala oo aan dhab ahayn, saas ma aha ee waxaa loo qurxiyey

kuwii gaaloobay dhagartooda waxaana laga leexiyey jidka, cid Alle dhumiyeyna ma laha wax hanuunin.

34. Waxayna mudan cadaab nolosha adduun, cadaabka aakhiraana daran mana u sugna wax Alle ka ilaalin.

35. Tusaalaha (tilmaanta) jannada loo darbay kuwa dhawrsada waa inay dhex socdaan wabiyaalkii, cunnadeeduna waa joogto iyo hooskeedu, taasina waa cidhibta kuwa dhawrsada, cidhibta gaaladuna waa naar.

لَّهُمْ عَذَابٌ فِى ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا ۖ وَلَعَذَابُ ٱلْءَاخِرَةِ أَشَقُّ ۖ وَمَا لَهُم مِّنَ ٱللَّهِ مِن وَاقٍ ﴿٣٤﴾

* مَّثَلُ ٱلْجَنَّةِ ٱلَّتِى وُعِدَ ٱلْمُتَّقُونَ ۖ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ ۖ أُكُلُهَا دَآئِمٌ وَظِلُّهَا ۚ تِلْكَ عُقْبَى ٱلَّذِينَ ٱتَّقَواْ ۖ وَّعُقْبَى ٱلْكَٰفِرِينَ ٱلنَّارُ ﴿٣٥﴾

Alle ayaa wax walba illaliya oo daalacan, wax la midana ma jiro, iyo wax ku dhaw midna, shurakada ay u yeeleenna waa been ay magacaabeen oon joogin dhulka iyo war muuqaalkiis, mase Alle ayay uga warrami khalqigiisa, kuwaas wuxuu shaydaan u qurxiyey dhagartooda, jidka xaqa ahna waa laga awday, wax toosinna ma helaan, waxayna mudan cadaab adduun iyo mid ka daran oo aakhiro, wax Alle ka dhawrina ma jiro, jannada loo darbay mu'miniinta dhawrsatana waa in wabiyaal dhex socdaan cunnadeeda iyo hooskeeduna joogto yahay, waana cidhibta kuwa dhawrsada, sida naartu u tahay cidhibta gaalada. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wax badan yuu fasiray aayadaha jannada ka warrami oo tilmaamay inay nicmo ku dhan tahay, xumaanna ka fogtahay, lagana dhimanayn, dhib iyo rafaadna lahayn, ciddii caqli lehna waa inay darbato, una guuro, una galab caraabo, una kallaho cid guurtayna way gaadhaa maqsadkeeda, haddiise lagu khaldamo dhalanteed iyo bidhaanta adduun waa uun khasaare iyo halaag. «Alle ha na toosiyo». **[Ar-Racd: 33-35].**

36. Kuwaan siinnay kitaabka waxay ku farxaan waxa lagugu soo dejiyey, xisbiyada waxaa ka mida kuwo diidi qaarkiis, waxaad dhahdaa waxaa uun lay faray inaan caabudo Alle una shariig yeelin, xaggiisaan u yeedhi xaggiisaana u noqon.

وَٱلَّذِينَ ءَاتَيْنَٰهُمُ ٱلْكِتَٰبَ يَفْرَحُونَ بِمَآ أُنزِلَ إِلَيْكَ ۖ وَمِنَ ٱلْأَحْزَابِ مَن يُنكِرُ بَعْضَهُۥ ۚ قُلْ إِنَّمَآ أُمِرْتُ أَنْ أَعْبُدَ ٱللَّهَ وَلَآ أُشْرِكَ بِهِۦٓ ۚ إِلَيْهِ أَدْعُواْ وَإِلَيْهِ مَـَٔابِ ﴿٣٦﴾

وَكَذَٰلِكَ أَنزَلْنَٰهُ حُكْمًا عَرَبِيًّا ۚ وَلَئِنِ ٱتَّبَعْتَ أَهْوَآءَهُم بَعْدَ مَا جَآءَكَ مِنَ ٱلْعِلْمِ مَا لَكَ مِنَ ٱللَّهِ مِن وَلِىٍّ وَلَا وَاقٍ ﴿٣٧﴾

37. Saasaana kuugu soo dejinnay xukun carabi ah, haddaad raacdo hawadoodana intuu cilmi ku soo gaadhay ka dib, kama helaysid xagga Alle gargaare iyo dhawre.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا رُسُلًا مِّن قَبْلِكَ وَجَعَلْنَا لَهُمْ أَزْوَٰجًا وَذُرِّيَّةً ۚ وَمَا كَانَ لِرَسُولٍ أَن يَأْتِىَ بِـَٔايَةٍ إِلَّا بِإِذْنِ ٱللَّهِ ۗ لِكُلِّ أَجَلٍ كِتَابٌ ﴿٣٨﴾

38. Waxaan dirray hortaa rasuullo waxaana u yeellay haween iyo caruur, rasuulna mucjiso lama imaan karo idimka Alle la'aantiis, muddo kastana way qoran tahay.

يَمْحُوا۟ ٱللَّهُ مَا يَشَآءُ وَيُثْبِتُ ۖ وَعِندَهُۥٓ أُمُّ ٱلْكِتَٰبِ ﴿٣٩﴾

39. Alle na wuu tiraa wuxuu doono wuuna sugaa, agtiisana waxaa ah looxul maxfuudka.

Kuwii ehelu kitaabka ahaa qaarkooda rumeeyey Nabiga iyo xaquu la yimid way ku farxayeen, inkastoo koox ka mida ay diidi xaqa qaarkiis, Nabigana waxaa la faray inuu Allehiis uun caabudo xaggiisana ugu yeedho dadka illeen xaggiisaa loo noqone, saasaana loogu soo dejiyey quraan carabi ah, ciddii raacda hawo dad oo xun iyagoo u cilmi leh kama helayo xagga Alle gargaare iyo ilaaliye midna, inuu Alle diro rasuulna waa jid Alle oo horreeyey waxayna yeesheen xaas iyo caruur, illeen waa bani Aadame, rasuul mucjiso la imaan karana ma jiro idimka Alle la'aantiis, wax kastana waqti go'an yuu leeyahay, wuxuu rabana Alle wuu tiraa, wuxuu doonana wuu sugaa, agtiisana waxaa ah looxul maxfuudka.

Taasina waxay ku tusin in ciddii cilmi iyo caqli leh ay rumayn Nabiga iyo quraanka, iyo in Alle kaliya la caabudo, looguna yeedho dadka, ciddii xaqa ka leexata ayan gargaare heleyn, in rasuulladu dad yihiin oy wax cuni waxna guursan waxna dhalaan, in mucjisadu xagga Alle ka timaaddo, in wax walba muddo leeyahay, in Alle wuxuu doono tiro kuu doonana sugo. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: ruuxa waxaa rizqiga looga hoojiyaa dambi dartiis, ducaduna qaddarkay wax ka tartaa, cimrigana waxaa siyaadiya samo fal. Waxaa wariyey Axmed, Nasaa'i iyo kuwo kale. **[Ar-Racd: 36-39].**

وَإِن مَّا نُرِيَنَّكَ بَعْضَ ٱلَّذِى نَعِدُهُمْ أَوْ نَتَوَفَّيَنَّكَ فَإِنَّمَا عَلَيْكَ ٱلْبَلَٰغُ وَعَلَيْنَا ٱلْحِسَابُ ﴿٤٠﴾

40. Haddaan ku tusinno qaar waxaan u yaboohi (oo dulli ah waa saas) haddaanse ku oofsanno waxaa uun korkaaga

ah gaadhsiin annagana waxaa na saaran inaan xisaabinno.

41. Miyeyna arkayn inaannu uga imaan dhulka darfaha annagoo nusqaamin, furasho (ama abaar), Alle na wuu xukumi, wax burinna ma jiro xukunkiisa, waana midkay deg deg tahay xisaabtiisu.

أَوَلَمْ يَرَوْا۟ أَنَّا نَأْتِى ٱلْأَرْضَ نَنقُصُهَا مِنْ أَطْرَافِهَا ۚ وَٱللَّهُ يَحْكُمُ لَا مُعَقِّبَ لِحُكْمِهِۦ ۚ وَهُوَ سَرِيعُ ٱلْحِسَابِ ﴿٤١﴾

42. Waxaa wax dhagray kuwii ka horreeyey Alle ayaase dhagar (abaal maris oo booskeeda dhacda) iska leh dhammaan, wuxuuna og yahay waxay kasban naf kasto, waxayna ogaan gaaladu cidday u ahaato cidhib fiican.

وَقَدْ مَكَرَ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ فَلِلَّهِ ٱلْمَكْرُ جَمِيعًا ۖ يَعْلَمُ مَا تَكْسِبُ كُلُّ نَفْسٍ ۗ وَسَيَعْلَمُ ٱلْكُفَّٰرُ لِمَنْ عُقْبَى ٱلدَّارِ ﴿٤٢﴾

43. Waxayna dhihi kuwii gaaloobay ma tihid rasuul, waxaad dhahdaa waxaa marag ugu filan dhexdeenna Alle iyo cidda agteed ogaanshaha kitaabku yahay.

وَيَقُولُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ لَسْتَ مُرْسَلًا ۚ قُلْ كَفَىٰ بِٱللَّهِ شَهِيدًۢا بَيْنِى وَبَيْنَكُمْ وَمَنْ عِندَهُۥ عِلْمُ ٱلْكِتَٰبِ ﴿٤٣﴾

Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) dhib ma saarra hadduu Alle ciqaabo gaalada intuu Nabigu nool yahayna waa wanaag, hadduu ka hor oofsadana waxaa uun Nabiga saaran gaadhsiin, Alle na xisaabtooda. Wuuna u gargaaray Alle rasuulkiisa, gaaladiina jabiyey isagoo nool, waxaana u muuqatay in dhulka darfaha laga soo nusqaaminayey oo islaamku ka adkaanayey gaalnimada, xukunkana Alle ayaa iska leh, wax xukunkiisa ka daba hadli karana ma jiro, xisaabtiisuna way deg degtaa, dhagarna waa shaqada gaalada ama ha horreeyeen ama ha dambeeyeene, Alle ayaase dhammaan abaal marin iska leh oo ka jaasayn, gaalana mar umbay ogaan cidda cidhibta fiican u hadho, waxayba ku af adeygeen inay Nabiga beeniyaan kuna dhahaan ma tihid rasuul, maxaase looga baahan yahay maraggooda, waxaa marag ugu filan Allehiis iyo ciddii cilmi leh oo rumeysan Nabiga oo ehelu kitaabkii ah.

Suuradduna waxay ku dhamaatay dhagarta gaalada xumideeda, in xaqu sarreyn, in cidhib fiican muslimiintu heli, in rasuullada Alle soo diray maragna ugu filan yahay. **[Ar-Racd: 40-43].**

Suurat Ibraahiim

سُورَةُ إِبۡرَٰهِيمَ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

الٓرۚ كِتَٰبٌ أَنزَلۡنَٰهُ إِلَيۡكَ لِتُخۡرِجَ ٱلنَّاسَ مِنَ ٱلظُّلُمَٰتِ إِلَى ٱلنُّورِ بِإِذۡنِ رَبِّهِمۡ إِلَىٰ صِرَٰطِ ٱلۡعَزِيزِ ٱلۡحَمِيدِ ١

1. Xarfaha hore oo kale waa la soo sheegay macnahooda, kanna waa kitaab aannu kugu soo dejinnay inaad kaga bixisid dadka mugdiyada una bixisid xagga nuurka idamka Alle hood iyo jidka Allaha adkaada ee la mahadiyo.

ٱللَّهِ ٱلَّذِي لَهُۥ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلۡأَرۡضِۗ وَوَيۡلٞ لِّلۡكَٰفِرِينَ مِنۡ عَذَابٖ شَدِيدٍ ٢

2. Ilaaha iska leh waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan, halaagna waxa mudan gaalada cadaab daran xaggiis.

ٱلَّذِينَ يَسۡتَحِبُّونَ ٱلۡحَيَوٰةَ ٱلدُّنۡيَا عَلَى ٱلۡأٓخِرَةِ وَيَصُدُّونَ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ وَيَبۡغُونَهَا عِوَجٗاۚ أُوْلَٰٓئِكَ فِي ضَلَٰلِۭ بَعِيدٖ ٣

3. Oo ah kuwa ka jecel nolosha adduun aakhiro oo ka leexiya (dadka) jidka Alle lana dooni qallooc, kuwaasuna waxay ku sugan yihiin baadi fog.

وَمَآ أَرۡسَلۡنَا مِن رَّسُولٍ إِلَّا بِلِسَانِ قَوۡمِهِۦ لِيُبَيِّنَ لَهُمۡۖ فَيُضِلُّ ٱللَّهُ مَن يَشَآءُ وَيَهۡدِي مَن يَشَآءُۚ وَهُوَ ٱلۡعَزِيزُ ٱلۡحَكِيمُ ٤

4. Rasuul kuma dirro waxaan afka qoomkiisa ahayn si uu ugu caddeeyo, wuuna baadiyeeyaa Alle cidduu doono inta xaqa loo caddeeyey ka dib, wuuna hanuunin cidduu doono, waana adkaade falsan.

Quraanka Alle ayaa ku soo dejiyey Nabiga Muxameda (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu dadka mugdiga iyo jahliga kaga saaro oo nuur iyo

jidka toosan ee Ilaahay u saaro, illeen Alle ayaa awood lehe, lana mahdiyaa, lehna cirka iyo dhulka waxa ku sugane, halaag iyo ciqaabna waxaa mudan gaalada adduun ka doortay aakhiro oo jidka Alle dadka ka leexiya doonina qalloociisa iyo xumaantiisa, kuwaasuna waa kuwa baadi fog ku sugan, xigmada Ilaahayna waxay keentay in rasuul kasta lagu bixiyo afka qoomkiisa si marka hore iyaga loo gaadhsiiyo markaas u faafto diintu, mana keenin xigmada Alle in afkasta lagu diro maxaa yeelay afafku way badan yihiin, saasaana Nabigeennii loogu bixiyey luuqada carabiga oo cidkastoo muslima iyo caalamkaba laga rabo inuu barto.

Rasuulkana waxaa saaran u caddeyn xaqa, dadkana waxaa saaran rumeyn, Alle na wuu xisaabin cid kasta waxay beeratay khayr iyo shar. **[Ibraahiim: 1-4].**

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا مُوسَىٰ بِـَٔايَـٰتِنَآ أَنْ أَخْرِجْ قَوْمَكَ مِنَ ٱلظُّلُمَـٰتِ إِلَى ٱلنُّورِ وَذَكِّرْهُم بِأَيَّـٰمِ ٱللَّهِ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَـَٔايَـٰتٍ لِّكُلِّ صَبَّارٍ شَكُورٍ ﴿٥﴾

5. Waxaan la dirray (Nabi) Muuse aayaadkannaga kagana bixi qoomkaaga mugdiyada una bixi xagga nuurka, kuna waani «xusuusi» nicmooyinkii Ilaahay, arrintaasna aayaad (calaamooyin) baa ugu sugan samir badane, shugri badan dhammaantiis.

وَإِذْ قَالَ مُوسَىٰ لِقَوْمِهِ ٱذْكُرُوا۟ نِعْمَةَ ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ إِذْ أَنجَىٰكُم مِّنْ ءَالِ فِرْعَوْنَ يَسُومُونَكُمْ سُوٓءَ ٱلْعَذَابِ وَيُذَبِّحُونَ أَبْنَآءَكُمْ وَيَسْتَحْيُونَ نِسَآءَكُمْ ۚ وَفِى ذَٰلِكُم بَلَآءٌ مِّن رَّبِّكُمْ عَظِيمٌ ﴿٦﴾

6. Iyo markuu Nabi Muuse ku yidhi qoomkiisa xusuusta nicmada Alle ee korkiinna la yeelay markuu idinka koriyey colkii Fircoon iyagoo idin dhadhansiin cadaab (daran) xun oo gawrici wiilashiinna oo dayn gabdhihiinna (dullaysi) arrintaasna waxaa ku sugnayd balaayo (imtixaam) Allihiin oo wayn.

وَإِذْ تَأَذَّنَ رَبُّكُمْ لَئِن شَكَرْتُمْ لَأَزِيدَنَّكُمْ ۖ وَلَئِن كَفَرْتُمْ إِنَّ عَذَابِى لَشَدِيدٌ ﴿٧﴾

7. Iyo markuu Allehiin ogaysiiyey haddaad shukridaan waan idiin kordhin, haddaad gaalowdaanna cadaabkaygu waa daran yahay.

وَقَالَ مُوسَىٰٓ إِن تَكْفُرُوٓا۟ أَنتُمْ وَمَن فِى ٱلْأَرْضِ جَمِيعًا فَإِنَّ ٱللَّهَ لَغَنِىٌّ حَمِيدٌ ﴿٨﴾

8. Wuxuuna yidhi (Nabi) Muuse haddaad gaalowdaan idinka iyo waxa ku sugan dhulka dhammaan Alle waa hodan mahadsan.

Alle wuxuu la diray Nabi Muuse sagaal mucjiso si uu qoomkiisa mugdiga uga saaro nuurkana u tusiyo, kuna wacdiyo isagoo xusuusin nicmooyinkii Alle, waana arrin calaamo u ah ciddii samir iyo shugri badan. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: amarka mu'minku waa la yaab, wax kastoo Alle u keeno waa u khayr, dhib hadduu ku dhaco wuu ku samraa khayr bayna u noqotaa, haddii wanaag soo gaadhana wuu ku shugriyaa khayrna way u noqotaa. «Waa xadiith saxiixa». Nabi Muusana wuxuu xusuusiyey qoomkiisii sida Alle ugu nicmeeyey ugana koriye Fircoonkii dullaystay ee wiilasha laynaayey gabdhahana dullaysanayey, waxayna ahayd imtixaam wayn, Alle na wuxuu dadka ogaysiiyey in ciddii ku shugridana uu u kordhin nicmada, tii ka gaalowdana cadaabka Alle daran yahay, dhammaan hadday dadku gaaloobaanna Alle waa hodan mahadsan, umana baahna taakulayn iyo gacansiin, waxaase kaalmo u baahan miskiinkaa dadka ah ee haddana markuu ladan yahay wax isbidi. **[Ibraahiim: 5-8].**

أَلَمْ يَأْتِكُمْ نَبَؤُاْ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِكُمْ
قَوْمِ نُوحٍ وَعَادٍ وَثَمُودَ وَٱلَّذِينَ مِنۢ
بَعْدِهِمْ لَا يَعْلَمُهُمْ إِلَّا ٱللَّهُ ۚ جَآءَتْهُمْ
رُسُلُهُم بِٱلْبَيِّنَٰتِ فَرَدُّوٓاْ أَيْدِيَهُمْ
فِىٓ أَفْوَٰهِهِمْ وَقَالُوٓاْ إِنَّا كَفَرْنَا بِمَآ
أُرْسِلْتُم بِهِۦ وَإِنَّا لَفِى شَكٍّ مِّمَّا
تَدْعُونَنَآ إِلَيْهِ مُرِيبٍ ﴿٩﴾

9. Miyuuna idin soo gaadhin warkii kuwii idinka horreeyey (oo ah) qoomkii Nabi Nuux, Caad, Thamuud, iyo kuwii ka dambeeyey, ma oga (tiradooda) Alle mooyee, waxayna ula yimaadeen rasuulladoodii xujooyin waxayna ku celiyeen gacmahooda afkooda (way beeniyeen) waxayna dhaheen anagu waan ka gaalownay waxa laydinku soo diray annaguna shaki daran baan kaga sugannahay waxaad noogu yeedhaysaan xaggiisa.

* قَالَتْ رُسُلُهُمْ أَفِى ٱللَّهِ شَكٌّ فَاطِرِ
ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۖ يَدْعُوكُمْ لِيَغْفِرَ
لَكُم مِّن ذُنُوبِكُمْ وَيُؤَخِّرَكُمْ إِلَىٰٓ
أَجَلٍ مُّسَمًّى ۚ قَالُوٓاْ إِنْ أَنتُمْ إِلَّا بَشَرٌ
مِّثْلُنَا تُرِيدُونَ أَن تَصُدُّونَا عَمَّا كَانَ
يَعْبُدُ ءَابَآؤُنَا فَأْتُونَا بِسُلْطَٰنٍ مُّبِينٍ ﴿١٠﴾

10. Waxay dheheen rasuuladoodii ma Alle ayaa shaki ku jiraa ee abuuray samooyinka iyo dhulka idiinkuna yeedhi inuu idinka dhaafo dambiyadiinna dibna idiin dhigo tan iyo muddo magacaaban, waxayna dheheen idinku ma tihiin waxaan

bashar (dad) nala mida ahayn, waxaadna doonaysaan inaad naga leexisaan waxay caabudi jireen aabbayaalkanno noo keena xujo cad.

قَالَتْ لَهُمْ رُسُلُهُمْ إِن نَّحْنُ إِلَّا بَشَرٌ مِّثْلُكُمْ وَلَٰكِنَّ ٱللَّهَ يَمُنُّ عَلَىٰ مَن يَشَآءُ مِنْ عِبَادِهِۦ ۖ وَمَا كَانَ لَنَآ أَن نَّأْتِيَكُم بِسُلْطَٰنٍ إِلَّا بِإِذْنِ ٱللَّهِ ۚ وَعَلَى ٱللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ ٱلْمُؤْمِنُونَ ﴿١١﴾

11. Rasuulladii waxay dheheen annagu ma nihin waxaan dad idin la mida ahayn, Alle ayaase ku mannaysta (khayr) cidduu doono oo addoommadiisa ka mida, xujana idiinma keeni karro idanka Alle mooyee, Alle uunna ha tala saarteen mu'miniintu.

وَمَا لَنَآ أَلَّا نَتَوَكَّلَ عَلَى ٱللَّهِ وَقَدْ هَدَىٰنَا سُبُلَنَا ۚ وَلَنَصْبِرَنَّ عَلَىٰ مَآ ءَاذَيْتُمُونَا ۚ وَعَلَى ٱللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ ٱلْمُتَوَكِّلُونَ ﴿١٢﴾

12. Maxaannaan u talo saaranayn Alle isagoo nagu hanuuniyey jidkannaga, waana ku samraynaa waxaad nagu dhibaysaan Alle uun ha talo saarteen kuwa talosaaran (cid).

Wax badan yuu Alle ka warramay ummadihii hore iyo waxa ku dhacay si loogu waano qaato, wayna badnaayeen, Nabiyadii iyo xaqiina way diideen, iyagoo shakiyey xaqa, rasuuladuse waxay u sheegeen inaan Alle iyo xaqu shaki lahayn, see loo shakin Allaha cirka iyo dhulka iyo wax kasta oo khalqi ah abuuray, runtii waxaa ka shakin Alle iyo abuurkiisa gaalada liita ee jecel inay xumaanta dabaashaan si aan waxna u celin, Alle dadka wuxuu ugu yeedhi dambi dhaaf, wuxuuna u yeelay waqti magacaaban, mana habboona in gaaladu xujaystaan in Nabiyadu dad la mida yihiin kana leexin waxay aabbayaalkood caabudi jireen, rasuuladuse waa dad Alle ayaase ku mannaystay waxyi iyo suubanaan, waxay la imaan karaanna ma jiro idin Alle la'aan tiis, Alle ayaana cid la talo saarto ah, mu'mininta iyo rasuuladuna isagay talo saartaan illeen isagaa hanuuniyey jidka toosanna tusiyey, waana in lagu samro oo loo adkaysto dhibka xaqa dartiis kugu gaadhi adoo isku dayi inaad si fiican isaga reebtid, Alle ayayna mu'miniintu talo saartaan. Wakaas xaqii iyo wanaaggii, maxayse hayaan gaalada xaqa diidaysa ee beenaalayaasha ah, waxba. **[Ibraahiim: 9-12].**

وَقَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لِرُسُلِهِمْ
لَنُخْرِجَنَّكُم مِّنْ أَرْضِنَآ أَوْ لَتَعُودُنَّ
فِي مِلَّتِنَا ۖ فَأَوْحَىٰٓ إِلَيْهِمْ رَبُّهُمْ لَنُهْلِكَنَّ
ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿١٣﴾

13. Waxay ku dheheen kuwii gaaloobay rasuulladoodii waxaynu idinka bixin dhulkannaga ama waxaad ku soo noqonaysaan (soo galaysaan) diintannada, wuxuuna u waxyooday Rabbigood inuu halaagayo daalimiinta.

وَلَنُسْكِنَنَّكُمُ ٱلْأَرْضَ مِنۢ بَعْدِهِمْ ۚ
ذَٰلِكَ لِمَنْ خَافَ مَقَامِي وَخَافَ
وَعِيدِ ﴿١٤﴾

14. Dajinna idinka dhulka kuwaas ka dib, arrintaasna waxaa heli ciddii ka cabsata la kulankayga oo ka cabsata gooddigayga.

وَٱسْتَفْتَحُواْ وَخَابَ كُلُّ جَبَّارٍ عَنِيدٍ ﴿١٥﴾

15. Wayna gargaar dalbeen waxaana khasaaray kibir badne madax adag dhammaantiis (xaq diid).

مِّن وَرَآئِهِۦ جَهَنَّمُ وَيُسْقَىٰ مِن مَّآءٍ
صَدِيدٍ ﴿١٦﴾

16. Waxaana ka horraysa jahannamo waxaana laga waraabin biyo carow ah (dhaacaanka ehelu naarka).

يَتَجَرَّعُهُۥ وَلَا يَكَادُ يُسِيغُهُۥ وَيَأْتِيهِ
ٱلْمَوْتُ مِن كُلِّ مَكَانٍ وَمَا هُوَ بِمَيِّتٍ ۖ
وَمِن وَرَآئِهِۦ عَذَابٌ غَلِيظٌ ﴿١٧﴾

17. Wuuna ku margan mana ka degayo wuuna uga imaan mawdku (geeridu) meel kasta, mana dhimanayo, gadaashiisna waxaa ah cadaab adag.

مَّثَلُ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ بِرَبِّهِمْ ۖ أَعْمَٰلُهُمْ
كَرَمَادٍ ٱشْتَدَّتْ بِهِ ٱلرِّيحُ فِي يَوْمٍ
عَاصِفٍ ۖ لَّا يَقْدِرُونَ مِمَّا كَسَبُواْ عَلَىٰ
شَيْءٍ ۚ ذَٰلِكَ هُوَ ٱلضَّلَٰلُ ٱلْبَعِيدُ ﴿١٨﴾

18. Kuwa ka gaaloobay Rabbigood wuxuu la mid yahay camalkoodu dambas ku darraatay «ku dhacday» dabayli maalin dabayl dhabasho daran, kama karaan (helaan) waxay kasbadeen waxba, kaasina waa baadida fog uun.

Siday caadada gaaladu tahay had iyo jeer waxay ku haddidi jireen rasuulladii inay dhulkooda ka eryi ama ay soo geli diintooda, waxaad mooddaa inay dhulka

iyaga kaliya leeyihiin dhabtuna waa in dhulka Alle leeyahay ugana raalli yahay inay ku noolaato ciddii caddaalad iyo islaannimo ku fulin oyan gaaladu lahayn say sheegi, daalin waa la halaagi waxaana u hadhi dhulka ciddii Alle ka yaabta, rasuulladii iyo gaaladuba way gargaar warsadeen, waxaase khasaari ciddii kibir badan oo xaqa iskala wayn galina cadaab daran oon geeri iyo nolol midna ahayn, gaalada camalkeeduna waa sida dambas dabaylu qaadday oo waxba kama helaan, waxayna ku sugan yihiin baadi fog. Waxaa Abii Umaamo laga wariyey in Nabigu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) in biyo naareed loo soo dhawayn gaalka oo uu nici wajiga iyo madaxana ka gubi markuu cabbana xiidmuhu soo daadan. Waxaa wariyay Imaam Axmed. Alle ha naga koriyo naarta. Camal baase loo baahan yahay. **[Ibraahiim: 13-18].**

أَلَمْ تَرَ أَنَّ ٱللَّهَ خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ بِٱلْحَقِّ ۚ إِن يَشَأْ يُذْهِبْكُمْ وَيَأْتِ بِخَلْقٍ جَدِيدٍ ﴿١٩﴾

19. Miyeydaan arkayn in Alle u abuuray samooyinka iyo dhulka xaq, hadduu doonana idin tagsiin karo lana imaan karo khalqi cusub.

وَمَا ذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ بِعَزِيزٍ ﴿٢٠﴾

20. Arrintaasina Alle kuma adka.

وَبَرَزُوا۟ لِلَّهِ جَمِيعًا فَقَالَ ٱلضُّعَفَٰٓؤُا۟ لِلَّذِينَ ٱسْتَكْبَرُوٓا۟ إِنَّا كُنَّا لَكُمْ تَبَعًا فَهَلْ أَنتُم مُّغْنُونَ عَنَّا مِنْ عَذَابِ ٱللَّهِ مِن شَىْءٍ ۚ قَالُوا۟ لَوْ هَدَىٰنَا ٱللَّهُ لَهَدَيْنَٰكُمْ ۖ سَوَآءٌ عَلَيْنَآ أَجَزِعْنَآ أَمْ صَبَرْنَا مَا لَنَا مِن مَّحِيصٍ ﴿٢١﴾

21. Waxayna dadku u soo bixi Alle markaasay ku dhihi kuwii «raaciyadda» ahaa kuwii madaxda ahaa anagu idinkaan idin raacaynay ee wax ma nooga taraysaan cadaabka Alle, waxayna dhahaan hadduu Alle na hanuuniyo waan idin hanuunin lahayn, waa isugu mid korkeenna haddaan argagaxno ama samirnno (adkaysanno) ma helayno fakasho.

وَقَالَ ٱلشَّيْطَٰنُ لَمَّا قُضِىَ ٱلْأَمْرُ إِنَّ ٱللَّهَ وَعَدَكُمْ وَعْدَ ٱلْحَقِّ وَوَعَدتُّكُمْ فَأَخْلَفْتُكُمْ ۖ وَمَا كَانَ لِىَ عَلَيْكُم مِّن سُلْطَٰنٍ إِلَّآ أَن دَعَوْتُكُمْ فَٱسْتَجَبْتُمْ لِى ۖ فَلَا تَلُومُونِى وَلُومُوٓا۟ أَنفُسَكُم ۖ

22. Wuxuuna dhahaa shaydaankii marka amarka la xukumo, Alle wuxuu idiin yaboohay yabooh xaq ah anna waan idiin yaboohay waana idinku beeniyey, wax xujo ahna idinkuma lahayn oon ahayn inaan idiin yeedhay

مَّآ أَنَا۠ بِمُصْرِخِكُمْ وَمَآ أَنتُم بِمُصْرِخِيَّ إِنِّى كَفَرْتُ بِمَآ أَشْرَكْتُمُونِ مِن قَبْلُ ۗ إِنَّ ٱلظَّٰلِمِينَ لَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٢٢﴾

ood i maqasheen ee hay dagaalina ee dagaala naftiinna anuguna idiinma gargaari karo idinna iima gargaari kartaan, anugu waan diiday waxaa ila wadaajiseen horay daalimiintuna waxay mudan cadaab daran.

وَأُدْخِلَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَا بِإِذْنِ رَبِّهِمْ ۖ تَحِيَّتُهُمْ فِيهَا سَلَٰمٌ ﴿٢٣﴾

23. Waxaana la gelin kuwii rumeeyey xaqa oo camal fiican falay jannooyin ay socoto dhexdeeda wabiyadii iyagoo ku dhex waari idanka Alle dartiis soo dhawayskooduna dhexdeeda waa salaan.

Dadkoo dhan Alle ayay hor imaan qiyaamada, waxaana is dagaali oo murmi madaxdii xumayd iyo raaciyaddoodii oo ay raaciyaddu dhihi idinkaa na dhumiyey ee wax ma noo taraysaan, iyana ugu jawaabi inayan waxba u tarayn, hadday argagaxaan iyo hadday adkaystaanna isku mid tahay wax u gargaarina ayan helayn, waxaana la xidhiidhiyey iyaga iyo shaydaan oo isna marka dadka la kala xukumo u sheegi kuwuu dhumiyey in Alle dhabta u sheegay isna been u sheegay wax xooga ama xujo ahna uusan u haysan saasna warkiisii ku maqleen, ee hays dagaaleen iyagu ee yeyna dagaalin isaga waxna isuma tari karaan, wuuna kaga baxay warkoodii, gaalna cadaab daran baa u sugnaaday, mu'miniintana waxaa la gelin jannooyin khayr ku dhan yahay oo ay ku waari, dhexdeedana ay salaan iyo nabadgalyo kala kulmi. Saasayna u muuqataa siday isu dagaali isuna canaanan madaxdii dhumisay dadkeeda iyo dadkeey dhumiyeen, iyo siduu shaydaan khudbo ugu akhrin kuwuu dhumiyey. Shacbi wuxuu yidhi: wuxuu ka khudbayn qiyaamada dadka hortooda. Saas darteed waa inaan cidna lagu raacin xumaan laga digtoonaado shaydaanka jinniga iyo kan insigaba, Alle na aan lagaa dhex marin si aad u liibaanto. **[Ibraahiim: 19-23].**

أَلَمْ تَرَ كَيْفَ ضَرَبَ ٱللَّهُ مَثَلًا كَلِمَةً طَيِّبَةً كَشَجَرَةٍ طَيِّبَةٍ أَصْلُهَا ثَابِتٌ وَفَرْعُهَا فِى ٱلسَّمَآءِ ﴿٢٤﴾

24. Ma ogtahay sida Alle ugu yeelay tusaale kalimada (erayga) fiican sida geed wanaagsan oo xididdadeedii dhulka ku sugan yihiin laamaheediina samada (kor jiraan).

تُؤْتِيٓ أُكُلَهَا كُلَّ حِينٍۭ بِإِذْنِ رَبِّهَا ۗ وَيَضْرِبُ ٱللَّهُ ٱلْأَمْثَالَ لِلنَّاسِ لَعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ ﴿٢٥﴾

25. Oo siisa (bixisa) cunnadeeda waqti kasta idanka Rabbigeed dartiis, wuuna u yeelaa Alle tusaalayaal dadka inay waantoomaan.

وَمَثَلُ كَلِمَةٍ خَبِيثَةٍ كَشَجَرَةٍ خَبِيثَةٍ ٱجْتُثَّتْ مِن فَوْقِ ٱلْأَرْضِ مَا لَهَا مِن قَرَارٍ ﴿٢٦﴾

26. Kalimada (erayga) xunna (gaalnimada iyo xumaanta) waxay la mid tahay geed xun lagana rujiyey dhulka korkiisa oon sugnaan lahayn.

يُثَبِّتُ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ بِٱلْقَوْلِ ٱلثَّابِتِ فِى ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا وَفِى ٱلْءَاخِرَةِ ۖ وَيُضِلُّ ٱللَّهُ ٱلظَّٰلِمِينَ ۚ وَيَفْعَلُ ٱللَّهُ مَا يَشَآءُ ﴿٢٧﴾

27. Wuxuu ku sugaa Alle kuwa rumeeyey xaqa erayga sugan (ashahaadada iyo xaqa) nolosha aduun iyo aakhiraba wuxuuna dhumiyaa daalimiinta, wuxuuna falaa Alle wuxuu doono.

* أَلَمْ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ بَدَّلُوا۟ نِعْمَتَ ٱللَّهِ كُفْرًا وَأَحَلُّوا۟ قَوْمَهُمْ دَارَ ٱلْبَوَارِ ﴿٢٨﴾

28. Ma ogtahay kuwa ku badelay nicmaddii Alle gaalnimo, dejiyeyna qoomkoodii guri halaag.

جَهَنَّمَ يَصْلَوْنَهَا ۖ وَبِئْسَ ٱلْقَرَارُ ﴿٢٩﴾

29. Jahannamayna gali meel lagu sugnaadana iyadaa u xun (jahannamo).

وَجَعَلُوا۟ لِلَّهِ أَندَادًا لِّيُضِلُّوا۟ عَن سَبِيلِهِۦ ۗ قُلْ تَمَتَّعُوا۟ فَإِنَّ مَصِيرَكُمْ إِلَى ٱلنَّارِ ﴿٣٠﴾

30. Waxayna u yeeleen Alle shariig inay ka dhumiyaan jidkiisa, waxaad dhahdaa raaxaysta ahaanshihiinnu waa naare.

Hadal fiican iyo xaqu wuxuu la mid yahay geed fiican oo midho badan waqti kastana cunno laga helo, tan xunna waxay la mid tahay geed xun oon sugnayn waxna laga helayn, hadalka fiicanna waxaa u horreeya ashahaadada waxaana soo raaca hadal kasta oo khayra, kan xunna waa gaalnimo iyo dambi iyo dhib muslim, Alle na wuxuu mu'miniinta ku sugaa adduunyo iyo aakhiraba hadalka sugan ee xaqa ah, waxaana Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ka sugnaaday xadiithyo badan oo ka warrami su'aasha qabriga iyo sida mu'minka Alle u waafajin xaqa una dhihi macbuudkaygu waa Ilaahay, diintaydu waa islaam, Nabigaygu waa Muxammad, markaas loo nicmayn, daalimiintase wuu dhumiyaa oo gafsiiyaa xaqa illeen iyagaa ka jeedsadaye,

Alle na wuxuu doono yuu falaa, wax ka xun ma jiro kuwa ku badasha nicmada xaqa iyo wanaagga gaalnimo iyo xaq diiddo, dadkoodiina dejiya una horseeda guri halaag iyo jab, iyo jahannamo iyo meel daran, una yeela Alle shurako iyo wax lala caabudo xaq darrana arrinkiisa lagu raaco, Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: gaaladoo dhan yaa loola jeedaa oo Alle wuxuu ku soo diray Nabiga Muxamada naxariis iyo nicmo, ciddii ogolaatana oo ku mahdisa Alle na jannay mudan, tii diidana ciqaabay mudan iyo cadaab, Cumar binu Khadhaab waxaa laga wariyey: waa labadii dambiilayaal ee Qureesh Binu Muqiira iyo Binu Umaya, Binu Muqiirase waxaa la halaagay maalintii Badar, Binu Umayase waxaa loo raaxeeyey muddo. **[Ibraahiim: 24-30].**

قُل لِّعِبَادِيَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ يُقِيمُواْ ٱلصَّلَوٰةَ وَيُنفِقُواْ مِمَّا رَزَقْنَٰهُمْ سِرًّا وَعَلَانِيَةً مِّن قَبْلِ أَن يَأْتِيَ يَوْمٌ لَّا بَيْعٌ فِيهِ وَلَا خِلَٰلٌ ﴿٣١﴾

31. Ku dheh addoomadayda rumeeyey (xaqa) ha oogeen salaadda hana ka nafaqeeyeen waxaan ku arsaaqay qarsoodi iyo muuqba ka hor imaatin maalin aan gadasho iyo saaxiib jirin (qiyaamada).

ٱللَّهُ ٱلَّذِي خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ وَأَنزَلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَأَخْرَجَ بِهِۦ مِنَ ٱلثَّمَرَٰتِ رِزْقًا لَّكُمْ ۖ وَسَخَّرَ لَكُمُ ٱلْفُلْكَ لِتَجْرِيَ فِي ٱلْبَحْرِ بِأَمْرِهِۦ ۖ وَسَخَّرَ لَكُمُ ٱلْأَنْهَٰرَ ﴿٣٢﴾

32. Alle waa kan abuuray samooyinka iyo dhulka kana soo dejiyey samada biyo kuna soo bixiyey midho rizqigiinna dartiis, idiinna sakhiray doonta inay ku socoto badda amarka Alle idiinna sakhiray wabiyada.

وَسَخَّرَ لَكُمُ ٱلشَّمْسَ وَٱلْقَمَرَ دَآئِبَيْنِ ۖ وَسَخَّرَ لَكُمُ ٱلَّيْلَ وَٱلنَّهَارَ ﴿٣٣﴾

33. Idiinkuna sakhiray qorraxda iyo dayaxa si joogta ah idiinna sakhiray habeenka iyo maalinta.

وَءَاتَىٰكُم مِّن كُلِّ مَا سَأَلْتُمُوهُ ۚ وَإِن تَعُدُّواْ نِعْمَتَ ٱللَّهِ لَا تُحْصُوهَآ ۗ إِنَّ ٱلْإِنسَٰنَ لَظَلُومٌ كَفَّارٌ ﴿٣٤﴾

34. Idinkana siiyey wax kastood warsataan, haddaad tirisaan nicmada Allena ma koobi kartaan, dadse waa dulmi badane gaalnimo badan.

وَإِذْ قَالَ إِبْرَٰهِيمُ رَبِّ ٱجْعَلْ هَٰذَا ٱلْبَلَدَ ءَامِنًا وَٱجْنُبْنِي وَبَنِيَّ أَن نَّعْبُدَ ٱلْأَصْنَامَ ﴿٣٥﴾

35. Xusuusta markuu Nabi Ibraahim yidhi Allow ka yeel baladkan (maka) aamin igana dheeree ani iyo caruurtayda inaan caabudno sanamyada.

رَبِّ إِنَّهُنَّ أَضْلَلْنَ كَثِيرًا مِّنَ ٱلنَّاسِ ۖ فَمَن تَبِعَنِى فَإِنَّهُۥ مِنِّى ۖ وَمَنْ عَصَانِى فَإِنَّكَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٣٦﴾

36. Allow waxay dhumiyeen wax badan oo dada, ciddii i raacdana waa iga mid tii i caasidana adaa danbi dhaafe naxariista ah.

Alle wuxuu faray addoomadiisa daacadiisa, salaad, wax bixin qarsoodi iyo muuqba qiyaamaha ka hor illeen wax gadid, ganacsi iyo saaxiibtinimo ma jirtee, Allaha mudan cibaadadaasna waa kan abuuray cirka iyo dhulka kana soo dejiyey cirka biyo cunno soo saara, una sahlay dadka markabka, qorraxda, dayaxa, wabiyada, habeenka iyo maalinta iyo wax kastooy u baahan yihiin, siiyana addoomadiisa waxay warsadaan, nicmada Alle ee xaq rumeyn, caafimaad, caqli, cilmi, rizqi iyo kuwo kale ee badan lehna wax tiro lagu koobi karo ma aha ee waxaa loo baahan yahay in lagu mahdiyo Alle, daacadiisa, wanaagga iyo khayrna loogu dhaqmo, illeen caadada dadka waxaa ka mida dulmi iyo xaqdiidnimo. Aayadaha dambe waxay ka warrami in Nabi Ibraahim Alle ka baryey inuu maka ka yeelo balad aamina kana fogeeyo isaga iyo caruurtiisaba inay sanam caabudaan illeen dad badanbaa ku dhumaye, in nicmada Alle lagu shugriyana waa waajib. Abii Dardaa waxaa laga wariyey: ruuxaan aqoonsan nicmada Alle korkiisa cunno iyo cabbid mooyee waxaa yaraaday camalkiisa waxaana soo dhawaaday cadaabkiisa. Camal fiican, dad anfac, xaq u yeedhid iyo wanaag yaa lagu mutaa gudashada shugriga Alle. **[Ibraahiim: 31-36].**

رَّبَّنَآ إِنِّىٓ أَسْكَنتُ مِن ذُرِّيَّتِى بِوَادٍ غَيْرِ ذِى زَرْعٍ عِندَ بَيْتِكَ ٱلْمُحَرَّمِ رَبَّنَا لِيُقِيمُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ فَٱجْعَلْ أَفْـِٔدَةً مِّنَ ٱلنَّاسِ تَهْوِىٓ إِلَيْهِمْ وَٱرْزُقْهُم مِّنَ ٱلثَّمَرَٰتِ لَعَلَّهُمْ يَشْكُرُونَ ﴿٣٧﴾

37. Allow waxaan dejiyey caruurtaydii (qaar) tog aan beer lahayna oo ah baydkaaga sharafta leh agtiisa Allow inay oogaan salaadda ee ka yeel quluubta dadka tii u iilata xaggooda kuna arzaaq midho inay shugriyaan.

رَبَّنَآ إِنَّكَ تَعْلَمُ مَا نُخْفِى وَمَا نُعْلِنُ ۗ وَمَا يَخْفَىٰ عَلَى ٱللَّهِ مِن شَىْءٍ فِى ٱلْأَرْضِ وَلَا فِى ٱلسَّمَآءِ ﴿٣٨﴾

38. Allow adugu waxaad ogtahay waxaannu qarin iyo waxaannu muujin, kamana qarsoona Alle waxba samada iyo dhulka (midna).

ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ ٱلَّذِى وَهَبَ لِى عَلَى ٱلْكِبَرِ إِسْمَٰعِيلَ وَإِسْحَٰقَ ۚ إِنَّ رَبِّى لَسَمِيعُ ٱلدُّعَآءِ ﴿٣٩﴾

39. Mahad Alle ayaa iska leh ee ah kan i siiyey anoo wayn Ismaaciil iyo Isxaaq Rabbigeyna waa maqlaha baryada (ajiibe).

40. Allow iga yeel mid ooga salaadda aniga iyo caruurtayda Allow aqbal baryadayda.

رَبِّ ٱجۡعَلۡنِي مُقِيمَ ٱلصَّلَوٰةِ وَمِن ذُرِّيَّتِي رَبَّنَا وَتَقَبَّلۡ دُعَآءِ ﴿٤٠﴾

41. Allow ii dambi dhaaf ani iyo labadaydii waalid iyo mu'miniinta maalinta ay kici xisaabtu (qiyaamadu).

رَبَّنَا ٱغۡفِرۡ لِي وَلِوَٰلِدَيَّ وَلِلۡمُؤۡمِنِينَ يَوۡمَ يَقُومُ ٱلۡحِسَابُ ﴿٤١﴾

42. Ha u malayn in Alle halmaansan yahay waxay fali daalimiintu, wuxuu uun dib ugu dhigi maalin ay taagmi dhexdiisa indhuhu.

وَلَا تَحۡسَبَنَّ ٱللَّهَ غَٰفِلًا عَمَّا يَعۡمَلُ ٱلظَّٰلِمُونَ إِنَّمَا يُؤَخِّرُهُمۡ لِيَوۡمٖ تَشۡخَصُ فِيهِ ٱلۡأَبۡصَٰرُ ﴿٤٢﴾

43. Oyna deg degi oo madax kor yeeli oosan soo noqonayn araggoodu (taagmi indhuhu) quluubtooduna ay madhan tahay «cabsi darteed».

مُهۡطِعِينَ مُقۡنِعِي رُءُوسِهِمۡ لَا يَرۡتَدُّ إِلَيۡهِمۡ طَرۡفُهُمۡۖ وَأَفۡـِٔدَتُهُمۡ هَوَآءٞ ﴿٤٣﴾

Aayadaha hore waxay aad ula xidhiidhaan aayadihii ka horreeyey, wuxuuna Nabi Ibraahim Alle ka baryey inuu quluubta dadka u soo jeediyo xagga baydkiisa uu ag dejiyey caruurtiis isagoon beer lahayn, wuxuuna ka baryey inuu ku arzaaqo midho si ay cibaadada u gutaan kuuguna shugriyaan, Alle na waa ka aqbalay oo waxaa muuqda in Maka balad nicmo tahay, waxaase loo baahan yahay camal fiican mahad Alle iyo isu naxariisasho, Nabi Ibraahim wuxuu isu bandhigay Alle oo uu yidhi adaa og wax kasta wax kaa qarsoonna ma jiro, wuuna ku mahdiyey Allaha siiyey Ismaaciil iyo Isxaaq isagoo wayn, illeen Alle ayaa ducada aqbalee, wuxuuna Alle ka baryey inuu ka yeelo mid daa'ima gudashada salaadda isaga iyo carruurtiisa ducadana ka aqbalo, una dambi dhaafo isaga, waalidiintiis, iyo mu'miniintaba maalinta lays xisaabin qiyaamada, maxaa ka cajab badan Nabi Ibraahim iyo naxariistiisa iyo xaalkiisa, tan kale Alle ma halmaansana daalimiintu waxay fali wuxuu dib ugu dhigi maalin indhuhu taagmi qiyaamada, oo cabsi badan, quluubtuna gilgilan cabsi darteed, dhibka qiyaame iyo culayska iyo waxyaalaha ku sugan waa wax Alle laga magan galo loona darbado lana feejignaado, Allaha sahlo. **[Ibraahiim: 37-43].**

44. Uga dig dadka maalintuu u iman cadaab oy odhan kuwii dulmi falay Allow dib noogu dhig muddo dhaw aan ajiibno

وَأَنذِرِ ٱلنَّاسَ يَوۡمَ يَأۡتِيهِمُ ٱلۡعَذَابُ فَيَقُولُ ٱلَّذِينَ ظَلَمُواْ رَبَّنَآ أَخِّرۡنَآ إِلَىٰٓ أَجَلٖ قَرِيبٖ نُّجِبۡ دَعۡوَتَكَ

وَنَتَّبِعِ ٱلرُّسُلَ ۗ أَوَلَمْ تَكُونُوٓاْ أَقْسَمْتُم مِّن قَبْلُ مَا لَكُم مِّن زَوَالٍ ﴿٤٤﴾

yeedhidaadee oon raacno rasuulladee, miyeydaan ahayn kuwii ku dhaartay horay inaydaan tegayn (oo aan la idin soo bixinayn).

وَسَكَنتُمْ فِي مَسَٰكِنِ ٱلَّذِينَ ظَلَمُوٓاْ أَنفُسَهُمْ وَتَبَيَّنَ لَكُمْ كَيْفَ فَعَلْنَا بِهِمْ وَضَرَبْنَا لَكُمُ ٱلْأَمْثَالَ ﴿٤٥﴾

45. Oo degteen guryihii kuwii dulmiyey naftooda oo idiin caddaaday sidaan ku fallay iyagii oon idiin yeellay tusaalayaal.

وَقَدْ مَكَرُواْ مَكْرَهُمْ وَعِندَ ٱللَّهِ مَكْرُهُمْ وَإِن كَانَ مَكْرُهُمْ لِتَزُولَ مِنْهُ ٱلْجِبَالُ ﴿٤٦﴾

46. Iyagoo dhagar samayn Alle agtiisaana abaalka dhagartoodu yahay, dhagartooduna ma aha mid ay la suulaan (oo ay la tagaan) buuruhu.

فَلَا تَحْسَبَنَّ ٱللَّهَ مُخْلِفَ وَعْدِهِۦ رُسُلَهُۥٓ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَزِيزٌ ذُو ٱنتِقَامٍ ﴿٤٧﴾

47. Ee ha u malayn in Alle baajin u yabooha rasuulladiisa illeen ilaahay waa adkaade aarsadee.

يَوْمَ تُبَدَّلُ ٱلْأَرْضُ غَيْرَ ٱلْأَرْضِ وَٱلسَّمَٰوَٰتُ ۖ وَبَرَزُواْ لِلَّهِ ٱلْوَٰحِدِ ٱلْقَهَّارِ ﴿٤٨﴾

48. Maalin buuna u (oofin) lagu bedeli dhulka dhul kale iyo samooyinkaba, waxaana loo soo bixi Allaha kalida ah ee awoodda sara leh.

Alle wuxuu faray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu uga digo dadka cadaab daran ka hor intayan warsan in dib loo dhigo muddo yar si ay u maqlaan xaqa rasuulladana u raacaan, waxayse horay ugu dhaarteen inayan ka guurayn adduunka, iyagoo waliba degay guryihii kuwii ka horreeyey ee daalimiinta ahaa ee la halaagay, una caddaatay sida Alle ku falay, haddana gaaladu dhagar iyo khiyaanad kama daayaan xaqa iyo mu'miniinta, inkastoon dhagartoodu buuro jajabinayn, oyse u dhawdahay, Alle na baajin maayo ballan qaadkiisii ahaa inuu rasuullada u gargaari, waana adkaade aarsada maalin dhulka iyo cirka lagu badali dhul kale iyo cir kale, dhammaan dadkuna u soo bixi Allaha kalida ah ee leh awoodda sare, waana maalinta qiyaame. Waxaa Bukhaari iyo Muslim ku sugnaaday in dadka lagu soo kulmin maalinta qiyaame dhul cad oo nadiifa oon cidna calaamo ku lahayn, siduu Nabigu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee). Alle ayaase u naxariisan mu'miniinta xaqa raacay ee si dhab ah u caabudday, wuxuuna ciqaabi xaq diidayaasha gaalada ah ee khayaamada, dhagarta, dhuminta iyo xumaanoo dhan u maleegi

xaqa iyo islaamka, adduunkase waa in lagu dulleeyo gacmaha muslimiinta, aakhirana waa inay la kulmaan wax madaxooda ka wayn oo ciqaab iyo dulli ah. **[Ibraahiim: 44-48].**

وَتَرَى ٱلْمُجْرِمِينَ يَوْمَئِذٍ مُّقَرَّنِينَ فِى ٱلْأَصْفَادِ ﴿٤٩﴾

49. Waxaadna arkaysaa danbiilayaashii oo maalintaas lagu xidhiidhiyay (lays kula xidhay) biro (naareed).

سَرَابِيلُهُم مِّن قَطِرَانٍ وَتَغْشَىٰ وُجُوهَهُمُ ٱلنَّارُ ﴿٥٠﴾

50. Dharkooduna (qamiisyadoodu) waa daamur (naara) waxaana dabooli wajigooda naar.

لِيَجْزِىَ ٱللَّهُ كُلَّ نَفْسٍ مَّا كَسَبَتْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ سَرِيعُ ٱلْحِسَابِ ﴿٥١﴾

51. Inuu ka abaal mariyo Alle naf kasta waxay kasbatay, Alle na way deg degtaa xisaabtiisu.

هَٰذَا بَلَٰغٌ لِّلنَّاسِ وَلِيُنذَرُوا۟ بِهِۦ وَلِيَعْلَمُوٓا۟ أَنَّمَا هُوَ إِلَٰهٌ وَٰحِدٌ وَلِيَذَّكَّرَ أُو۟لُوا۟ ٱلْأَلْبَٰبِ ﴿٥٢﴾

52. Quraankana waa gaadhsiin dadka iyo in loogu digo iyo inay ogaadaan in Alle ilaah kaliya uun yahay, iyo inay waantooto cidda caqliga leh (mu'miniinta).

Alle cidna ma dulmiyo ee dadku iyagaa naftooda dulmiya, maalinta xisaabta ee qiyaamana cid walba waxaa laga abaal marin camalkeeda, waxaana danbiilayaasha gaaloobay la isugu xidhxidhi kooxo iyo labolabo iyagoo loo xidhi dhar naara wajigoodana naaru dabooli, taasina waa in Alle ka abaal marin ruux kasta wuxuu kasbaday, oy Alle na deg degto xisaabtiisu, quraankuna waa xaq iyo war dhab ah oo cad kana soo fulay xaakimka awoodda badan ee wax kasta ku hoos jiraan, Ilaaheenna wayn, lana gaadhsiin aduunka iyo dadkoo dhan, si loogu digo, iyo inay ogaadaan in Alle Ilaah kaliya yahay oy kuna waano qaataan kuwa caqliga leh. Taasina waxay ku tusin in dambiilayaasha la abaal marin, in quraanku iyo diinta islaamku caalami yahay, dadkoo dhanna ay waajib ku tahay rumayntiisu, raaciddiisa, ku dhaqankiisa, ugu yeedhidda dadka, ogaansho inuu u suubbado wakhti kasta, in wanaag ku dhan yahay, inuu yahay jidkii jannada iyo liibaan adduun iyo aakhiroba. **[Ibraahiim: 49-52].**

Suurat Al-Xijr

سُورَةُ الحِجۡرِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Xarfaha hore waa la soo sheegay macnahooda, kuwanna waa aayadaha kitaabka iyo quraanka cad.

الٓرۚ تِلۡكَ ءَايَٰتُ ٱلۡكِتَٰبِ وَقُرۡءَانٖ مُّبِينٖ ١

2. Wax badan bay tamannin (jeclaan) kuwii gaaloobay (aakhiro) inay muslimiin ahaadaan (adduunkii).

رُّبَمَا يَوَدُّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لَوۡ كَانُواْ مُسۡلِمِينَ ٢

3. Ka tag ha cuneen hana raaxaysteene hana shuqliso yididdiilo way ogaan doonaane.

ذَرۡهُمۡ يَأۡكُلُواْ وَيَتَمَتَّعُواْ وَيُلۡهِهِمُ ٱلۡأَمَلُۖ فَسَوۡفَ يَعۡلَمُونَ ٣

4. Magaalo la halaago oo kasta waxaa u sugnaaday wakhti la yaqaanno.

وَمَآ أَهۡلَكۡنَا مِن قَرۡيَةٍ إِلَّا وَلَهَا كِتَابٞ مَّعۡلُومٞ ٤

5. Kamana hor marto ummadi ajasheeda (wakhtigeeda) kamana dib marto.

مَّا تَسۡبِقُ مِنۡ أُمَّةٍ أَجَلَهَا وَمَا يَسۡتَـٔۡخِرُونَ ٥

6. Waxay dhaheen kan quraanka lagu soo dejiyayow adugu waad waalan tahay.

وَقَالُواْ يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِي نُزِّلَ عَلَيۡهِ ٱلذِّكۡرُ إِنَّكَ لَمَجۡنُونٞ ٦

7. Maad malaa'ig noo keentid haddaad run sheegi.

لَّوۡ مَا تَأۡتِينَا بِٱلۡمَلَٰٓئِكَةِ إِن كُنتَ مِنَ ٱلصَّٰدِقِينَ ٧

8. Umana soo dejinno malaa'igta xaq mooyee lamana sugeen gaalada (markaas).

مَا نُنَزِّلُ ٱلۡمَلَٰٓئِكَةَ إِلَّا بِٱلۡحَقِّ وَمَا كَانُوٓاْ إِذٗا مُّنظَرِينَ ٨

9. Annagaa soo dejinnay quraanka annagaana dhawri.

إِنَّا نَحْنُ نَزَّلْنَا ٱلذِّكْرَ وَإِنَّا لَهُۥ لَحَٰفِظُونَ ﴿٩﴾

Quraanku waa kitaab xaq ah, suganna oo Alle soo dejiyay, gaaladuna markay ku kaliyoobaan naarta oo dadkii caasiyiinta ahaa ee muslimiinta ahaa laga saaro naarta yay shallaayi waxay muslimiin u noqon waayeen, waase la dhaafay saacaddeedii, waqti calaacalna wuu dhammaaday ee waa uun janno mu'min iyo naar danbiilayaal, illeen adduunkii yay iska cuneen oy isaka raaxeysteen iyagoo xaqa beeniyay wayse arki waxa ku dhaca aakhiro, cid kastana mudday leedahay ayna ka hor marayn kana dib marayn marka la halaagi, marka xaqa loo caddeeyo. Gaaladii waxay ku sheegeen Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu waalan yahay waxayna warsadeen in malaa'ig loo soo dejiyo, malaa'igtu farriin ama halaag unbay la soo degtaa.

Tan kale Alle ayaa quraanka soo dajiyay isagaana ilaalin, Alle na wakaas ka dhawray quraanka halmaansho, baddalaad, leexin, nusqaamin iyo wixii ku dhacay kutubihii hore oo leexin ah, waxaadna aragtaa in malaayiin muslimiina xifdisan tahay meelo kala duwan oo caalamka ah, waxaa kaliya ee loo baahan yahay in lagu dhaqmo, lagana qaato xukunka, mucaamilada, maamulka iyo wax kastoo nolosha taaban, illeen waa kitaab adduun iyo aakhiree, mase aha siday rabaan gaaladu iyo jaahiliintu inuu noqdo kitaab aakhiro kaliya. **[Al-Xijr: 1-9].**

10. Waxaan u dirray hortaa (rasuullo) ummadihii hore.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا مِن قَبْلِكَ فِى شِيَعِ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿١٠﴾

11. Rasuul kasta oo u yimaaddana waxay ahaayeen kuwo ku jeesjeesa.

وَمَا يَأْتِيهِم مِّن رَّسُولٍ إِلَّا كَانُوا۟ بِهِۦ يَسْتَهْزِءُونَ ﴿١١﴾

12. Saasaana u galinaa (gaalnimada) quluubta dambiilayaasha.

كَذَٰلِكَ نَسْلُكُهُۥ فِى قُلُوبِ ٱلْمُجْرِمِينَ ﴿١٢﴾

13. Mana rumeeyaan quraanka, waxaana tegay (hor maray) sunnadii «jidkii» kuwii horreeyey.

لَا يُؤْمِنُونَ بِهِۦ وَقَدْ خَلَتْ سُنَّةُ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿١٣﴾

14. Haddaan uga furro korkooda irrid samada ooy ahaadaan kuwo kora.

وَلَوْ فَتَحْنَا عَلَيْهِم بَابًا مِّنَ ٱلسَّمَآءِ فَظَلُّوا۟ فِيهِ يَعْرُجُونَ ﴿١٤﴾

15. Waxay odhan lahaayeen waxaa uun la awday (la tiray) aragyadannadii, waxaabanse nahay qoom la sixray.

لَقَالُوٓاْ إِنَّمَا سُكِّرَتْ أَبْصَٰرُنَا بَلْ نَحْنُ قَوْمٌ مَّسْحُورُونَ ﴿١٥﴾

16. Waxaan yeellay samada buruuj (meelo) waxaan u qurxinnay kuwa dayi (eegi).

وَلَقَدْ جَعَلْنَا فِي ٱلسَّمَآءِ بُرُوجًا وَزَيَّنَّٰهَا لِلنَّٰظِرِينَ ﴿١٦﴾

17. Waxaan ka dhawrnay shaydaan la tuuray «fogeeyey» dhammaantiis.

وَحَفِظْنَٰهَا مِن كُلِّ شَيْطَٰنٍ رَّجِيمٍ ﴿١٧﴾

18. Mid dafa maqalka oo danab cad raaco mooyee.

إِلَّا مَنِ ٱسْتَرَقَ ٱلسَّمْعَ فَأَتْبَعَهُۥ شِهَابٌ مُّبِينٌ ﴿١٨﴾

19. Dhulkana waan fidinnay waxaanna ku ridnay «sugnay» dhexdeeda buuro, waxaana ka soo bixinnay wax kasta oo miisaaman.

وَٱلْأَرْضَ مَدَدْنَٰهَا وَأَلْقَيْنَا فِيهَا رَوَٰسِيَ وَأَنۢبَتْنَا فِيهَا مِن كُلِّ شَيْءٍ مَّوْزُونٍ ﴿١٩﴾

20. Waxaana idiinka yeellay dhexdiisa nolol iyo waxaydaan arzaaqi karin.

وَجَعَلْنَا لَكُمْ فِيهَا مَعَٰيِشَ وَمَن لَّسْتُمْ لَهُۥ بِرَٰزِقِينَ ﴿٢٠﴾

Alle wuxuu u diray rasuullo ummadihii hore, wayna ku jeesjeesi jireen rasuul kasta, saasayna quluubtooda xumaan loo galiyey ooyen quraanka iyo xaqa u rumeynin, wax badan baana la halaagay hortood, gaalnimadooda iyo madax adaygooda, haddii samadaa irdaha looga furo oo ay koraan waxay dhihi lahaayeen waa nala indho awday oo xaq ma aragno waana nala sixray, samadana Alle wuxuu yeelay manaasil iyo qurux ciddii eegi oo ku waano qaadan waana laga dhawray shaydaan mid maqalka dafa oo danab raaco mooyee, dhulkana wakaa Alle fidiyey buurana ku sugay, cunno miisaamanna ka soo saaray, nololna dadka u dhex yeelay iyaga iyo waxayna arzaaqi karin oo xoola ah, Alle ayaa wayn, wataas awoodiisu iyo khalqigiisu iyo naxariistiisu iyo nicmooyinkiisu, yaase ku waano qaadan oo rumeyn, oo ku mahdin oon mu'miniinta ahayn. **[Al-Xijr: 10-20].**

21. Waxaan agtannada khasnadihiisu «kaydkiisu» ahayn ma jiro, umana soo dejinno qaddar la og yahay mooyee.

وَإِن مِّن شَيْءٍ إِلَّا عِندَنَا خَزَآئِنُهُۥ وَمَا نُنَزِّلُهُۥٓ إِلَّا بِقَدَرٍ مَّعْلُومٍ ﴿٢١﴾

22. Waxaana dirnaa dabaysha oo tallaasha (daruurta) waxaana ka soo dajinnaa samada biyo aan idinku waraabinno idinkoon ahayn kuwo ka keydsan kara (gudhidda).

وَأَرْسَلْنَا ٱلرِّيَٰحَ لَوَٰقِحَ فَأَنزَلْنَا مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَأَسْقَيْنَٰكُمُوهُ وَمَآ أَنتُمْ لَهُۥ بِخَٰزِنِينَ ﴿٢٢﴾

23. Annagaa wax nooleeyna waxna dilla, anagaana wax dhaxalla uun (u hadhna).

وَإِنَّا لَنَحْنُ نُحْىِۦ وَنُمِيتُ وَنَحْنُ ٱلْوَٰرِثُونَ ﴿٢٣﴾

24. Waxaana ognahay kuwiinna hor maray waxaana ognahay kuwiinna dib maray.

وَلَقَدْ عَلِمْنَا ٱلْمُسْتَقْدِمِينَ مِنكُمْ وَلَقَدْ عَلِمْنَا ٱلْمُسْتَـْٔخِرِينَ ﴿٢٤﴾

25. Rabbigaana isagaa soo kulmin dadka waana falsame oge ah.

وَإِنَّ رَبَّكَ هُوَ يَحْشُرُهُمْ ۚ إِنَّهُۥ حَكِيمٌ عَلِيمٌ ﴿٢٥﴾

26. Annagaana ka abuurray dadka dhoobo engegan oo doorsoon.

وَلَقَدْ خَلَقْنَا ٱلْإِنسَٰنَ مِن صَلْصَٰلٍ مِّنْ حَمَإٍ مَّسْنُونٍ ﴿٢٦﴾

27. Jaankana (jinniga) waxaan ka abuurray mar hore naar samuum leh (kulayl).

وَٱلْجَآنَّ خَلَقْنَٰهُ مِن قَبْلُ مِن نَّارِ ٱلسَّمُومِ ﴿٢٧﴾

Wax kasta Alle agtiisa wuxuu ku leeyahay khasnad iyo meel kayd, wax walbana wuxuu ku leeyahey Alle agtiisa qaddar la yaqaanno, dabayshana Alle ayaa soo dira si ay u tallaasho daruuraha, samadana Alle ayaa uga keena kana waraabiya iyagoon kaydsan karin hadday gudhaan oo ceelku ama wabigu ingago, Alle ayaana wax nooleeya waxna dila, una hadhi dhulka marka khalqigu halaagsamo isagaana og ciddii hor mari iyo tii dib mari, ama camal fiican iyo camal xun ama geeri iyo nolol ama jahaadka iyo ka tagiddiisa, Alle ayaana dhammaan soo kulmin illeen waa falsame wax walba oge. Dadkana Alle ayaa asalkoodii ka abuuray carro engegan oo ah dhoobo sidiba, jinnigana ka abuuray naar kulul, aayaduhuna waxay ku tusin in wax walba kaydkoodu Alle agtiis yaal, in wax kasta qaddar la yaqaan leeyahay, in Alle inoogu naxariisto roobka iyo biyaha, wax Alle ka soo hadhay oo kaydin karana jirin, geeri iyo nololla Alle ayaa haya, isagaana baaqi ah, ciddii hor mar sheegan iyo mid dib u dhac ku yimidna Alle ayaa oge ma aha war iyo hadal layska yidhi, in Alle soo kulmin dadka, in Alle dadka assalkoodii Nabi Aadan ka abuuray carro engegan oo ah dhoobo sidiba, oyan ahayn siday gaalada doqomada ah ee wax u dhimman yihiin sheegi, iyo in jinniga laga abuuray naar. Waxaasoo dhanna waxay sugi cibaadada iyo xaqnimada Alle. **[Al-Xijr: 21-27].**

وَإِذْ قَالَ رَبُّكَ لِلْمَلَٰٓئِكَةِ إِنِّي خَٰلِقٌۢ بَشَرًا مِّن صَلْصَٰلٍ مِّنْ حَمَإٍ مَّسْنُونٍ ﴿٢٨﴾

28. Xusuuso markuu ku yidhi Rabbigaa malaa'igta anugu waxaan ka abuuri dad carro engegtay qoyaan ka dib oo dhoobo sidiba.

فَإِذَا سَوَّيْتُهُۥ وَنَفَخْتُ فِيهِ مِن رُّوحِى فَقَعُوا۟ لَهُۥ سَٰجِدِينَ ﴿٢٩﴾

29. Ee markaan ekeeyo kuna afuufo dhexdiisa ruuxdayda ugu dhaca sujuud.

فَسَجَدَ ٱلْمَلَٰٓئِكَةُ كُلُّهُمْ أَجْمَعُونَ ﴿٣٠﴾

30. Wayna sujuudeen malaa'igtii dhammaan oo kulansan.

إِلَّآ إِبْلِيسَ أَبَىٰٓ أَن يَكُونَ مَعَ ٱلسَّٰجِدِينَ ﴿٣١﴾

31. Ibliis oo diiday inuu ka mid noqdo kuwa sujuuday mooyee.

قَالَ يَٰٓإِبْلِيسُ مَا لَكَ أَلَّا تَكُونَ مَعَ ٱلسَّٰجِدِينَ ﴿٣٢﴾

32. Wuxuuna yidhi (Alle) Ibliisow maxaad leedahay oodan u noqonin kuwa sujuuda.

قَالَ لَمْ أَكُن لِّأَسْجُدَ لِبَشَرٍ خَلَقْتَهُۥ مِن صَلْصَٰلٍ مِّنْ حَمَإٍ مَّسْنُونٍ ﴿٣٣﴾

33. Wuxuuna yidhi ma ihi mid u sujuudi dad aad ka abuurtay carro engegan oo dhoobo sidiba.

قَالَ فَٱخْرُجْ مِنْهَا فَإِنَّكَ رَجِيمٌ ﴿٣٤﴾

34. Wuxuuna yidhi Alle ka bax xaggeeda adigu waa lagu fogeeyaye.

وَإِنَّ عَلَيْكَ ٱللَّعْنَةَ إِلَىٰ يَوْمِ ٱلدِّينِ ﴿٣٥﴾

35. Korkaagana waxaa ah lacnad tan iyo maalinta abaal marinta (qiyaamada).

قَالَ رَبِّ فَأَنظِرْنِىٓ إِلَىٰ يَوْمِ يُبْعَثُونَ ﴿٣٦﴾

36. Wuxuuna yidhi Rabbigeeyow i sug tan iyo maalinta la soo bixin dadka.

قَالَ فَإِنَّكَ مِنَ ٱلْمُنظَرِينَ ﴿٣٧﴾

37. Wuxuuna yidhi Alle adugu kuwa la sugi yaad ka mid tahay.

إِلَىٰ يَوْمِ ٱلْوَقْتِ ٱلْمَعْلُومِ ﴿٣٨﴾

38. Tan iyo maalinta wakhtiga la yaqaan leh.

Abuuridda Nabi Aadan iyo sida Alle u faray malaa'igta inay u sujuudaan iyagoo salaami een caabudaynin, iyo sida Ibliis u diiday, isagoo iska kibriyay oo u sheegan jaahilnimo inuu ka asal fiican yahay iyo sida Alle u lacnaday

naxariistiisana uga dheereeyay, loona sugay tan iyo maalinta dadka la soo bixin dhammaan waxaa lagaga sheegay quraanka meelo badan, waxaase loo baahan yahay uun in la ogaado in Ibliis iyo xisbigiisu oo ah inta gaalnimada iyo xumaanta ku raacday ay col u yihiin mu'mininta, islaamka, quraanka iyo wanaagga, saas darteed waa in laga digtoonaado colna laga yeesho, samahana lagu dadaalo. **[Al-Xijr: 28-38].**

قَالَ رَبِّ بِمَآ أَغۡوَيۡتَنِي لَأُزَيِّنَنَّ لَهُمۡ فِي ٱلۡأَرۡضِ وَلَأُغۡوِيَنَّهُمۡ أَجۡمَعِينَ ﴿٣٩﴾

39. Wuxuuna yidhi Ibliis Rabbigeeyow i baadiyayntaada darteed waxaan u qurxin dhulka dhexdiisa waana dhumin dhammaan.

إِلَّا عِبَادَكَ مِنۡهُمُ ٱلۡمُخۡلَصِينَ ﴿٤٠﴾

40. Addoommadaada cibaadada kuu kali yeelay mooyee (lana doortay).

قَالَ هَٰذَا صِرَٰطٌ عَلَيَّ مُسۡتَقِيمٌ ﴿٤١﴾

41. Alle wuxuu yidhi kaasi waa jid igu toosan (oo layska abaal marin).

إِنَّ عِبَادِي لَيۡسَ لَكَ عَلَيۡهِمۡ سُلۡطَٰنٌ إِلَّا مَنِ ٱتَّبَعَكَ مِنَ ٱلۡغَاوِينَ ﴿٤٢﴾

42. Addoommadayda (toosan) kuma lihid xujo cid ku raacday oo kuwa baadida ah ka mida mooyee.

وَإِنَّ جَهَنَّمَ لَمَوۡعِدُهُمۡ أَجۡمَعِينَ ﴿٤٣﴾

43. Jahanamaana yaboohoodu yahay (inta dhunta) dhammaan.

لَهَا سَبۡعَةُ أَبۡوَٰبٖ لِّكُلِّ بَابٖ مِّنۡهُمۡ جُزۡءٞ مَّقۡسُومٌ ﴿٤٤﴾

44. Waxayna leedahay toddoba irridood oo irrid kastana waxay leedahay qaddar loo qaybiyay (oo ibliis iyo colkiisa ah).

Alle wuu dhumiyey Ibliis, isna wuxuu ku dhaartay inuu dhumiyo dadka dhammaan marka laga reebo addoommada Alle ee toosan, kuwaasna Ibliis jid kuma leh, waxayna mudan Ibliis iyo inta raacday naarta jahannamo oo toddobo irridood leh, irrid kastana loo darbay ciddii gali lahayd oo ah Ibliis iyo colkiisa (Alle ha naga koriyee), iridahaasna waxay u kala gali sida loo sii kala xun yahay. Rasuulkana (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) waxaa laga wariyay: jahannama waxay leedahay toddoba iridood waxaana ka mid ah irrid uu ka gali ruuxii u siibta seefta ummadayda. Waxaa wariyay Tirmidi. Waana xadiith taag daran. Cali binu Abii Dhaalib (Alle ha ka raalli

noqdee) wuxuu yidhi: irridaha jahannamo waa toddobo is kor saaran, waana la buuxin dhammaan. Waa wax Alle laga magan galo. Camal fiican oo ah Alle caabudid dhaba, raacid quranakiisa, adeeciddda Rasuulkiisa iyo xaq ku socod yaana lagaga koraa. **[Al-Xijr: 39-44].**

إِنَّ ٱلْمُتَّقِينَ فِى جَنَّٰتٍ وَعُيُونٍ ﴿٤٥﴾

45. Kuwa Alle ka dhawrsada waxay gali jannooyin iyo ilo (durduri).

ٱدْخُلُوهَا بِسَلَٰمٍ ءَامِنِينَ ﴿٤٦﴾

46. Waxaana la dhahaa ku gala nabad galyo iyo aamminnimo.

وَنَزَعْنَا مَا فِى صُدُورِهِم مِّنْ غِلٍّ إِخْوَٰنًا عَلَىٰ سُرُرٍ مُّتَقَٰبِلِينَ ﴿٤٧﴾

47. Waxaanna ka siibnaa waxa laabtooda ku jira oo xiqdi ah, waana walaalo sariira isqaabilsan ku sugan.

لَا يَمَسُّهُمْ فِيهَا نَصَبٌ وَمَا هُم مِّنْهَا بِمُخْرَجِينَ ﴿٤٨﴾

48. Kumana taabto jannada dhexdeeda dhib xaggeedana lagama bixiyo.

نَبِّئْ عِبَادِىٓ أَنِّىٓ أَنَا ٱلْغَفُورُ ٱلرَّحِيمُ ﴿٤٩﴾

49. U warran addoommadayda inaan anugu danbi dhaafe naxariista ahay.

وَأَنَّ عَذَابِى هُوَ ٱلْعَذَابُ ٱلْأَلِيمُ ﴿٥٠﴾

50. Iyo in cadaabkaygu uu yahay cadaabka daran uun.

وَنَبِّئْهُمْ عَن ضَيْفِ إِبْرَٰهِيمَ ﴿٥١﴾

51. Ugana warran dadka martidii Nabi Ibraahim (ee malaa'igta ahayd).

إِذْ دَخَلُوا۟ عَلَيْهِ فَقَالُوا۟ سَلَٰمًا قَالَ إِنَّا مِنكُمْ وَجِلُونَ ﴿٥٢﴾

52. Markay u soo galeen kuna dhaheen salaan kuna yidhi waanu idinka cabsan.

قَالُوا۟ لَا تَوْجَلْ إِنَّا نُبَشِّرُكَ بِغُلَٰمٍ عَلِيمٍ ﴿٥٣﴾

53. Ooy dhaheenna ha cabsan waxaannu kuugu bishaarayn wiil cilmi yeelane.

قَالَ أَبَشَّرْتُمُونِى عَلَىٰٓ أَن مَّسَّنِىَ ٱلْكِبَرُ فَبِمَ تُبَشِّرُونَ ﴿٥٤﴾

54. Wuxuuna ku yidhi ma waxaad ii bishaaraynaysaan anoo odaynimo i taabatay, maxaad iigu bishaaraynaysaan.

قَالُواْ بَشَّرۡنَٰكَ بِٱلۡحَقِّ فَلَا تَكُن مِّنَ ٱلۡقَٰنِطِينَ ﴿٥٥﴾

55. Waxayna dhaheen waxaannu kuugu bishaaraynay xaq ee ha noqonnin mid quusta.

قَالَ وَمَن يَقۡنَطُ مِن رَّحۡمَةِ رَبِّهِۦٓ إِلَّا ٱلضَّآلُّونَ ﴿٥٦﴾

56. Wuxuuna yidhi yaa ka quusta naxariista Rabbigiis kuwa baadida ah mooyee.

Alle wuxuu raaciyay xaalka mu'miniinta oo ah inay janno aan xiqdi iyo xasad iyo xumaan iyo dhib lahayn ay gali iyagoo walaalo ah isasoo qaabilina, Alle na waa dambi dhaafe, waana ciqaabe, waana in dambi dhaaf la warsado, cadaabkiisana laga digtoonaado. Aayadaha kalana waxay ka warrami sida meelo kale oo quraanka ah lagu sheegay Nabi Ibraahim iyo malaa'igtii bishaarada u waday iyo siduu uga yaabay iyo siday u xasiliyeen uguna bishaareeyeen, markuu sheegtay inuu duq yahayna ay u sheegeen inay dhab u wadaan kana quusan naxariista Alle, wuxuuse u sheegay in ay naxariista Alle ka quustaan kuwa dhumay, saas darteed waa in Alle la rumeeyo naxariistiisana la rajeeyo iyadoo la camal fali. **[Al-Xijr: 45-56].**

قَالَ فَمَا خَطۡبُكُمۡ أَيُّهَا ٱلۡمُرۡسَلُونَ ﴿٥٧﴾

57. Wuxuu yidhi xaalkiinnu muxuu yahay kuwan la soo dirayaw.

قَالُوٓاْ إِنَّآ أُرۡسِلۡنَآ إِلَىٰ قَوۡمٖ مُّجۡرِمِينَ ﴿٥٨﴾

58. Waxayna dhaheen waxaa naloo diray qoom danbiilayaal ah xaggood.

إِلَّآ ءَالَ لُوطٍۖ إِنَّا لَمُنَجُّوهُمۡ أَجۡمَعِينَ ﴿٥٩﴾

59. Ehelka (Nabi) Luudh mooyee oo waanu korin dhammaantood.

إِلَّا ٱمۡرَأَتَهُۥ قَدَّرۡنَآ إِنَّهَا لَمِنَ ٱلۡغَٰبِرِينَ ﴿٦٠﴾

60. Haweenaydiisa mooyee oo noqon kuwa ku hadhi (halaagga).

فَلَمَّا جَآءَ ءَالَ لُوطٍ ٱلۡمُرۡسَلُونَ ﴿٦١﴾

61. Markay u yimaadeen ehelkii Nabi Luudh kuwii la soo diray.

قَالَ إِنَّكُمۡ قَوۡمٞ مُّنكَرُونَ ﴿٦٢﴾

62. Wuxuu yidhi idinku waxaad tihiin qoom aan la garanaynin.

قَالُواْ بَلۡ جِئۡنَٰكَ بِمَا كَانُواْ فِيهِ يَمۡتَرُونَ ﴿٦٣﴾

63. Waxayna dhaheen saas ma aha ee waxaannu kuula nimid waxay shakisanaayeen (halaaggoodii).

وَأَتَيۡنَٰكَ بِٱلۡحَقِّ وَإِنَّا لَصَٰدِقُونَ ﴿٦٤﴾

64. Waxaana kuula nimid xaq, runna waan sheegaynaa.

فَأَسْرِ بِأَهْلِكَ بِقِطْعٍ مِّنَ ٱلَّيْلِ وَٱتَّبِعْ أَدْبَرَهُمْ وَلَا يَلْتَفِتْ مِنكُمْ أَحَدٌ وَٱمْضُوا۟ حَيْثُ تُؤْمَرُونَ ﴿٦٥﴾

65. Ee guuri ehelkaaga qayb habeenka ka mida socona gadaashooda yayna soo milicsan ruux ka mida (dib), kuna socda meesha laydin faray.

وَقَضَيْنَآ إِلَيْهِ ذَٰلِكَ ٱلْأَمْرَ أَنَّ دَابِرَ هَٰٓؤُلَآءِ مَقْطُوعٌ مُّصْبِحِينَ ﴿٦٦﴾

66. Waxaana u waxyoonnay amarkaas ah in cidhibta kuwaas la goyn subaxdii.

Nabi Ibraahim wuxuu warsaday xaalkooda, waxayna u sheegeen in loo soo diray inay halaagaan qoomka Nabi Luudh ee danbiilayaasha ah ehelkiisa oon haweenaydiisu ku jirin mooyee oo iyada la halaagi, markay Nabi Luudh u yimaadeenna wuu garan waayay, waxayna u sheegeen inay ula yimaadeen waxay shakisnaayeen oo ah halaaggooda, wuxuuna Alle faray inuu guuriyo ehelkiisa uuna daba socdo dibna cidi soo eegin una socdaan meeshii la faray, waxaana loo waxyooday Nabi Luudh in xaalka kuwaas lagu dhammeeyay in la cidhibgoyn aroortii.

Waxayna ku tusin wanaagga in la isu bishaareeyo, inaan qaraabannimo dadka hanuunin karin inkastooy waajib tahay in qaraabada lagula dadaalo khayr iyo dadkaba dhammaan, in Alle ka aarsan danbiilayaasha, in amarka Alle fuli iyo in Ilaahay lagu xidhnaado xaqana la raaco isaga unbaa wax tariye. **[Al-Xijr: 57-66].**

وَجَآءَ أَهْلُ ٱلْمَدِينَةِ يَسْتَبْشِرُونَ ﴿٦٧﴾

67. Waxaana yimid dadkii baladka oo bishaaraysan (aragga martida).

قَالَ إِنَّ هَٰٓؤُلَآءِ ضَيْفِى فَلَا تَفْضَحُونِ ﴿٦٨﴾

68. Wuxuuna yidhi kuwan waa martidaydii ee ha igu ceebaynina.

وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَلَا تُخْزُونِ ﴿٦٩﴾

69. Kana dhawrsada Alle hana i dullaynina.

قَالُوٓا۟ أَوَلَمْ نَنْهَكَ عَنِ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٧٠﴾

70. Waxayna dhaheen miyaannaan kaa reebin caalamka (inaad marti galiso cidna).

قَالَ هَٰٓؤُلَآءِ بَنَاتِىٓ إِن كُنتُمْ فَٰعِلِينَ ﴿٧١﴾

71. Wuxuuna yidhi kuwaasi waa gabdhahaygii haddaad wax falaysaan (ood guursanaysaan).

لَعَمْرُكَ إِنَّهُمْ لَفِى سَكْرَتِهِمْ يَعْمَهُونَ ﴿٧٢﴾

72. Cimrigaagee iyagu baadi bay ku wareersan yihiin.

فَأَخَذَتْهُمُ ٱلصَّيْحَةُ مُشْرِقِينَ ﴿٧٣﴾

73. Waxaana qabatay qayladii qorrax soo baxa.

فَجَعَلْنَا عَٰلِيَهَا سَافِلَهَا وَأَمْطَرْنَا عَلَيْهِمْ حِجَارَةً مِّن سِجِّيلٍ ﴿٧٤﴾

74. Waxaanna ka yeellay korkoodii hoostooda, waxaanna ku soo daadinnay korkooda dhagaxyo naar ah.

إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَٰتٍ لِّلْمُتَوَسِّمِينَ ﴿٧٥﴾

75. Arrintaasna calaamooyin baa ugu sugan kuwa fiirfiiriya (fikira).

وَإِنَّهَا لَبِسَبِيلٍ مُّقِيمٍ ﴿٧٦﴾

76. Waxayna ku taal magaaladaas waddo toosan (oy maraan oo cad).

إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَةً لِّلْمُؤْمِنِينَ ﴿٧٧﴾

77. Arrintaasna calaamad yaa ugu sugan kuwa xaqa rumeeyay.

Dadkii magaalada waxay soo qaabileen martidii iyagoo dooni caadadoodii xumayd, wuxuuse warsaday Nabi Luudh inayna ku ceebeeynin kuna dullaynin martidiisa, hana guursadeen gabdhihiisa iyo kuwa magaalada, waxayse ku sugnaayeen wareer iyo baadi, halkiibaana lagu halaagay aroortii oo la daba gadiyay dhagax naar ahna lagu soo daadiyay waana arrin lagu waano qaato ciddii fikiri ama rumayn, wayna muuqataa meeshii lagu halaagay. Waxaana loo baahan yahay in la fikiro wanaaggana la raaco. Xumaantana laga fogaado.

Abii Saciid waxaa laga wariyay in Rasuulku (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) uu yidhi: ka dhawrsada saadinta mu'minka wuxuu wax ku arkaa nuurka Alle e (Ibni Abii Xaatim). Waana faraasada. Culima badani xadiithka taagdarro ayay ku sheegeen. **[Al-Xijr: 67-77].**

وَإِن كَانَ أَصْحَٰبُ ٱلْأَيْكَةِ لَظَٰلِمِينَ ﴿٧٨﴾

78. Waxayna ahaayeen qoomkii kaynta daalimiin (qoomkii Nabi shucayb).

فَٱنتَقَمْنَا مِنْهُمْ وَإِنَّهُمَا لَبِإِمَامٍ مُّبِينٍ ﴿٧٩﴾

79. Waana ka aarsannay, waxayna labaduba degganaayeen waddo cad (oo la yaqaanno).

وَلَقَدْ كَذَّبَ أَصْحَٰبُ ٱلْحِجْرِ ٱلْمُرْسَلِينَ ﴿٨٠﴾

80. Waxayna beeniyeen qoomkii Xijrina kuwii loo soo diray (Saalax).

وَءَاتَيْنَٰهُمْ ءَايَٰتِنَا فَكَانُوا۟ عَنْهَا مُعْرِضِينَ ﴿٨١﴾

81. Waana siinnay aayaadkannagii waxayna ahaayeen kuwa xaggeeda ka jeedsada.

وَكَانُوا۟ يَنْحِتُونَ مِنَ ٱلْجِبَالِ بُيُوتًا ءَامِنِينَ ﴿٨٢﴾

82. Waxayna ahaayeen kuwo ka qota buuraha guryo iyagoo aamina.

فَأَخَذَتْهُمُ ٱلصَّيْحَةُ مُصْبِحِينَ ﴿٨٣﴾

83. Waxaana qabatay qaylo aroortii.

فَمَآ أَغْنَىٰ عَنْهُم مَّا كَانُوا۟ يَكْسِبُونَ ﴿٨٤﴾

84. Waxna uma tarin waxay kasbanayeen.

وَمَا خَلَقْنَا ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَآ إِلَّا بِٱلْحَقِّ ۗ وَإِنَّ ٱلسَّاعَةَ لَءَاتِيَةٌ ۖ فَٱصْفَحِ ٱلصَّفْحَ ٱلْجَمِيلَ ﴿٨٥﴾

85. Samooyinka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeyana waxaan xaq ahayn umaannan abuurin saacadduna way iman ee iska saamax saamixid quruxsan.

إِنَّ رَبَّكَ هُوَ ٱلْخَلَّٰقُ ٱلْعَلِيمُ ﴿٨٦﴾

86. Rabbigaabaa ah abuuraha cilmiga lehe.

Qoomkii Nabi Shucayb iyana waxay ahaayeen daalimiin xaqa beenisay, waxayna degganaayeen iyaga iyo qoomkii Nabi Luudhba jid la maro oo la yaqaan oy habboon tahay in lagu waano qaato, sidoo kale qoomkii Nabi saalax waxay beeniyeen xaqii uu ula yimid iyo mucjisadii, kana jeedsadeen iyagoo ku noolaa meesha la yidhaah Xijri oo xagga Tabuug ah iyagoo buuraha guryo ka samaysan jiray iyagoo aamina, waase la ciqaabay waxna uma tarin xoolohoodii, waxaana ku dhacay masiibo. Rasuulkuna (naxariis iyo nabad galyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi maruu maray guryahoodii: ha galina guryihii kuwii la caddibay idinkoo ooyi mooyee, cabsi laga cabsanayo inuu idinku dhaco wixii ku dhacay. (Waa xadiith saxiix ah). Tan kale Alle wuxuu u abuuray cirka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya xigmad, caddaalad iyo tusid qudrada Alle iyo ku waano qaadasho, illeen saacaddii qiyaamaa imane, waana samir iyo dhaafid la isticmaalo waxaan diinta u dhib ahayn, Alle na waa abuuraha wax walba og. Saas darteed waa in wanaagga lagu dadaalo, xumaanta, macaasida, beeninta xaqa iyo dhibka islaamkana laga fogaado. **[Al-Xijr: 78-86].**

87. Waxaan ku siinnay toddobo soo noqnoqota «faataxada» iyo quraanka wayn.

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَٰكَ سَبْعًا مِّنَ ٱلْمَثَانِى وَٱلْقُرْءَانَ ٱلْعَظِيمَ ﴿٨٧﴾

88. Ee ha u taagin indhahaaga waxaan ugu raaxaynay qaybo ka mida, hana u murugoon, una raarici (jilci) garabkaaga (macaamiladooda) mu'miniinta.

لَا تَمُدَّنَّ عَيْنَيْكَ إِلَىٰ مَا مَتَّعْنَا بِهِۦٓ أَزْوَٰجًا مِّنْهُمْ وَلَا تَحْزَنْ عَلَيْهِمْ وَٱخْفِضْ جَنَاحَكَ لِلْمُؤْمِنِينَ ﴿٨٨﴾

89. Waxaadna dhahdaa anugu waxaan uun ahay u dige cad.

وَقُلْ إِنِّىٓ أَنَا ٱلنَّذِيرُ ٱلْمُبِينُ ﴿٨٩﴾

90. Sidaan ugu soo dejinnay cadaab kuwii isu dhaarsaday (dhibka xaqa).

كَمَآ أَنزَلْنَا عَلَى ٱلْمُقْتَسِمِينَ ﴿٩٠﴾

91. Ee ka yeelay quraanka qaybo.

ٱلَّذِينَ جَعَلُوا۟ ٱلْقُرْءَانَ عِضِينَ ﴿٩١﴾

92. Rabbigaa baan ku dhaartaye waan warsanaynaa dhammaantood.

فَوَرَبِّكَ لَنَسْـَٔلَنَّهُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٩٢﴾

93. Waxay falayeen.

عَمَّا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿٩٣﴾

94. Ee muuji waxa lagu fari iskagana jeedso mushrikiinta.

فَٱصْدَعْ بِمَا تُؤْمَرُ وَأَعْرِضْ عَنِ ٱلْمُشْرِكِينَ ﴿٩٤﴾

95. Annagaa kaa kaafiyeyna kuwa jeesjeesa.

إِنَّا كَفَيْنَٰكَ ٱلْمُسْتَهْزِءِينَ ﴿٩٥﴾

96. Ee yeela Alle miciisa ilaah kale wayna ogaan doonaan (waxa ku dhaca).

ٱلَّذِينَ يَجْعَلُونَ مَعَ ٱللَّهِ إِلَٰهًا ءَاخَرَ ۚ فَسَوْفَ يَعْلَمُونَ ﴿٩٦﴾

97. Waxaanna ognahay laabtaadu inay ka cidhiidhyami waxay sheegi (oo xun).

وَلَقَدْ نَعْلَمُ أَنَّكَ يَضِيقُ صَدْرُكَ بِمَا يَقُولُونَ ﴿٩٧﴾

98. Ee ku tasbiixso mahadda Rabbigaa ahawna kuwa sujuuda.

فَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ وَكُن مِّنَ ٱلسَّٰجِدِينَ ﴿٩٨﴾

99. Caabudna Allehaa intay yaqiintu kaaga timaaddo (geeridu).

وَٱعۡبُدۡ رَبَّكَ حَتَّىٰ يَأۡتِيَكَ ٱلۡيَقِينُ ٩٩

Alle wuxuu siiyey Nabiga faataxada iyo quraanka wayn, wuxuuna faray inayna khaldin adduunyo, una murgin gaalada, si fiicanna kula noolaado mu'miniinta illeen waa dige cade, ugana digo wixii ku dhacay kuwii xaqa dhibkiisa isu dhaarsaday oo kala qaybiyey quraanka, Alle na wuxuu faray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu xaqa muujiyo oo la jahro qarisna dhammaado, illeen Alle ayaa kaga filan kuwa jees jeesee, wuuna kaga fillaaday oo ciqaabay, illeen quraankay kala qaybiyeene, oo ilaah kale yeesheene, wayna ogaan ciqaabta ku dhacda, iyo inayna laabtiisu la cidhiidhyamin xaq beeninta iyo xumaantay sheegi, iyo inuu daa'imo oo badiyo tasbiixda, mahadda iyo cibaadada Alle inta yaqiintu oo geerida ah uga timaaddo, taasina waxay ku tusin in cibaadada Alle waajib tahay inta ruux nool yahay, Ibnu Kathiir wuxuu yidhi: waxayse sheegeen diin laawayaashu oo ah in yaqiinta loola jeedo darajo aqooneed oo marka la gaadho cibaadadu ka dhici ruuxa waa gaalnimo, baadi iyo jaahilnimo, illeen Nabiyadii iyo asaxaabahood baa Alle ugu yaqiinnay uguna cilmi badnaa, waxayna ahaayeen kuwa ugu cabsi iyo Alle caabudid badan daacada way daa'imeen intay geeridu uga timid. Xaqana waa saas, suuradduna waxay ku dhamaatay in quraanku wayn yahay, in dadka loo digo, in xaqa la muujiyo, in Alle xaqa u gargaari, in Alle kaliya la caabudo, in la adkaysto Alle na la caabudo inta laga geeriyoodo. **[Al-Xijr: 87-99].**

Suurat An-Naxl

سُورَةُ النَّحۡلِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaa yimid amarkii Alle qiyaamihii (iyo ciqaab) ee ha dedejisannina, waxaa ka nasahan oo sarreeya Alle waxay la wadaajin.

أَتَىٰٓ أَمۡرُ ٱللَّهِ فَلَا تَسۡتَعۡجِلُوهُۚ سُبۡحَٰنَهُۥ وَتَعَٰلَىٰ عَمَّا يُشۡرِكُونَ ١

2. Wuxuu la soo dejiyaa malaa'igta waxyi oo amarkiisa ka mida, (kuna dejiyaa) cidduu doono oo addoommadiisa ka mida, oo ah ugu diga inaan ani mooyee ku kaloo xaq lagu caabudaa jirin ee ani uun iga dhawrsada.

يُنَزِّلُ ٱلۡمَلَٰٓئِكَةَ بِٱلرُّوحِ مِنۡ أَمۡرِهِۦ عَلَىٰ مَن يَشَآءُ مِنۡ عِبَادِهِۦٓ أَنۡ أَنذِرُوٓاْ أَنَّهُۥ لَآ إِلَٰهَ إِلَّآ أَنَا۠ فَٱتَّقُونِ ٢

3. Wuxuu u abuuray Alle samooyinka iyo dhulka xaq, wuuna ka sarreeyaa waxay la wadaajin.

خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضَ بِٱلۡحَقِّۚ تَعَٰلَىٰ عَمَّا يُشۡرِكُونَ ٣

4. Wuxuu ka abuuray dadka dhibic markaasuu noqdaa mid ah dood badane cad.

خَلَقَ ٱلۡإِنسَٰنَ مِن نُّطۡفَةٖ فَإِذَا هُوَ خَصِيمٞ مُّبِينٞ ٤

5. Xoolahana wuu idiin abuuray dhexdoodana waxaa ah duggaal iyo nacfi xaggeedaadna ka cuntaan.

وَٱلۡأَنۡعَٰمَ خَلَقَهَاۖ لَكُمۡ فِيهَا دِفۡءٞ وَمَنَٰفِعُ وَمِنۡهَا تَأۡكُلُونَ ٥

6. Qurux baana idiinku sugan dhexdooda markaad dheelmaysaan iyo markaad foofinaysaan.

وَلَكُمۡ فِيهَا جَمَالٌ حِينَ تُرِيحُونَ وَحِينَ تَسۡرَحُونَ ٦

7. Waxaadna ugu raratаan culaysyo xagga magaalo oydaan gaadhayn naf dhibkeed mooyee Rabbigiinna waa u ture naxariista.

وَتَحْمِلُ أَثْقَالَكُمْ إِلَىٰ بَلَدٍ لَّمْ تَكُونُوا۟ بَٰلِغِيهِ إِلَّا بِشِقِّ ٱلْأَنفُسِ ۚ إِنَّ رَبَّكُمْ لَرَءُوفٌ رَّحِيمٌ ﴿٧﴾

Qiyaamada iyo maalinta aakhiro waa xaq imaan, saas darteed yuu Alle uga cabbiray wax dhacay illeen waa hubaale, markay muslimiintii aad u cabsadeenna waxaa soo degay inayna dedejisanin, Alle na la wadaajis cibaado waa ka nasahan yahay kana sarreeyaa, waxyigana wuxuu malaa'igta ugu soo dhiibaa cidduu doono oo Nabiyada ka mida, si ay ugu digaan inaan ani mooyee ku kaloo xaq lagu caabudaa jirin, kana dhawrsadaan. Cirka iyo dhulkana wuxuu u abuuray xaq, xumaanna wuu ka sarreeyaa, dadka wuxuu ka abuuray dhibic markaasay murmaan oo isla waynaadaan, xoolaha Alle ayaa dadka u abuuray isagoo duggaal iyo nacfi iyo cunno ugu sugan yahay, iyo qurux markay dheelman iyo markay foofi, kuna rartaan culays ay la aadaan meel ayna gaadheen dhib mooyee, taasina waa naxariista Alle, saas darteed waa in Alle si dhaba loo caabudo, laguna mahdiyo nicmooyinkiisa, lagana digtoonaado kibirka isla waynida, muran xaq darro iyo madax adaygga, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu candhuuf ku tufay gacantiisa wuxuuna yidhi: Alle wuxuu dhahaa: bani Aadamow sideed ii daalin anoo kaa abuuray waxanoo kale, markaad ekaatay ood waynaatay ood ku socotay dharkaaga iyo dhulka, ood kulmisay xoolo reebtayna, markay naftu dhuunta gaadhana aad dhahdid haddaan sadaqysan, ma haddaa waqti sadaqa ah. Waxaa wariyey imaam Axmed iyo Ibnu Maajah. **[An-Naxl: 1-7].**

8. Fardaha iyo baqlaha iyo dameeraha wuxuu (idiin ku abuuray Alle) inaad kortaan iyo qurux, wuxuuna abuuri waxaydaan ogayn.

وَٱلْخَيْلَ وَٱلْبِغَالَ وَٱلْحَمِيرَ لِتَرْكَبُوهَا وَزِينَةً ۚ وَيَخْلُقُ مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿٨﴾

9. Xagga Alle ayaana jid toosan yahay (hanuun), mid leexsanna waa jiraa (xumaanta) hadduu doonana wuu idin hanuunin lahaa dhammaan.

وَعَلَى ٱللَّهِ قَصْدُ ٱلسَّبِيلِ وَمِنْهَا جَآئِرٌ ۚ وَلَوْ شَآءَ لَهَدَىٰكُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٩﴾

10. Alle waa kan idiinka soo dejiyay samada biyo, xaggiisaa laga cabbaa xagiisaana geeduhu ka ahaadaan aad daajisaan (xoolaha).

هُوَ ٱلَّذِىٓ أَنزَلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً ۖ لَّكُم مِّنْهُ شَرَابٌ وَمِنْهُ شَجَرٌ فِيهِ تُسِيمُونَ ﴿١٠﴾

11. Wuxuuna idiinku soo bixiyaa beero, saytuun, timir, cinab iyo wax kastoo midha ah, arrintaasna calaamad baa ugu sugan ciddii fikiri.

يُنۢبِتُ لَكُم بِهِ ٱلزَّرۡعَ وَٱلزَّيۡتُونَ وَٱلنَّخِيلَ وَٱلۡأَعۡنَٰبَ وَمِن كُلِّ ٱلثَّمَرَٰتِۗ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَأٓيَةٗ لِّقَوۡمٖ يَتَفَكَّرُونَ ١١

12. Wuxuuna idiin sakhiray habeenka, maalinta, qorraxda, dayaxa, xiddigahana waxaa lagu sakhiray amarkiisa, arrintaasna calaamooyin yaa ugu sugan ciddii wax kasi.

وَسَخَّرَ لَكُمُ ٱلَّيۡلَ وَٱلنَّهَارَ وَٱلشَّمۡسَ وَٱلۡقَمَرَۖ وَٱلنُّجُومُ مُسَخَّرَٰتُۢ بِأَمۡرِهِۦٓۗ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَأٓيَٰتٖ لِّقَوۡمٖ يَعۡقِلُونَ ١٢

13. Iyo wuxuu idiinku abuuray dhulka oo kala duwan yahay midabkeedu, arrintaasna calaamad yaa ugu sugan ciddii wax xasuusan (fikiri).

وَمَا ذَرَأَ لَكُمۡ فِي ٱلۡأَرۡضِ مُخۡتَلِفًا أَلۡوَٰنُهُۥٓۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَأٓيَةٗ لِّقَوۡمٖ يَذَّكَّرُونَ ١٣

Alle wuxuu ku mannaysan nimcooyin badan oon la koobi karin halkanna waxaa lagu sheegay fardaha, baqlaha iyo dameeraha oo Alle u abuuray in lagu intifaaco iyo in lagu xarragoodo, wuxuuna Alle sheegay inuu abuuri waxayna ogayn, taasina waa mucjisada quraanka oo Alle had iyo jeer wuxuu ahaysiiyaa waxaan jiri jirin, xagga Alle ayaana jid toosan oo xaqa yahay, kuwa ka leexday Alle na waa jiraan, hadduu doonana wuu hanuunin lahaa dhammaan, waxaa kale oo nicmooyinka Alle ka mida roobka wax laga cabo, lana daaqsado dooggiisa, kuna soo bixiyo beero kala duwan iyo midho nooc kasta leh, waana arrin ciddii fikiri ay ku waano qaadato, waxaa kale oo ka mida nimcooyinka Alle ee u baahan in laga faa'iidaysto habeenka, maalinta, qorraxda, dayaxa iyo xiddigaha, oo lagu sakhiray amarka Alle iyo nicmooyinka kale ee kala duwan ee Alle ku abuuray dhulka dadka dartiis, waana wax ay ku waano qaataan kuwa caqliga leh iyo xusuusta, wanaagna falaan xumaanna ka tagaan, Alle na si dhaba u mahadiyaan una caabudaan. **[An-Naxl: 8-13].**

14. Alle waa kan idiin sakhiray badda inaad ka cuntaan hilib cusub kalana baxdaan qurux (macdan) ood xidhataan, waxaadna aragtaan doonida (markabka) oo dillaacin (dabbaalan) dhexdeeda iyo inaad

وَهُوَ ٱلَّذِي سَخَّرَ ٱلۡبَحۡرَ لِتَأۡكُلُواْ مِنۡهُ لَحۡمٗا طَرِيّٗا وَتَسۡتَخۡرِجُواْ مِنۡهُ حِلۡيَةٗ تَلۡبَسُونَهَاۖ وَتَرَى ٱلۡفُلۡكَ مَوَاخِرَ فِيهِ وَلِتَبۡتَغُواْ مِن فَضۡلِهِۦ وَلَعَلَّكُمۡ تَشۡكُرُونَ ١٤

doontaan fadliga Alle iyo inaad ku shugridaan.

15. Wuxuuna ku riday (sugay) dhulka buuro inayna idinla iilan (wuxuuna yeelay) wabiyo iyo wadooyin inaad ku toostaan.

وَأَلْقَىٰ فِي ٱلْأَرْضِ رَوَٰسِيَ أَن تَمِيدَ بِكُمْ وَأَنْهَٰرًا وَسُبُلًا لَّعَلَّكُمْ تَهْتَدُونَ ﴿١٥﴾

16. Iyo calaamado iyo xiddigo ay dadku ku toosaan.

وَعَلَٰمَٰتٍ ۚ وَبِٱلنَّجْمِ هُمْ يَهْتَدُونَ ﴿١٦﴾

17. Cid wax abuuri ma la midbaa mid aan wax abuurayn, miyaydaan wax xasuusanayn.

أَفَمَن يَخْلُقُ كَمَن لَّا يَخْلُقُ ۗ أَفَلَا تَذَكَّرُونَ ﴿١٧﴾

18. Haddaad tirisaan nicmada Alle ma koobi kartaan, Alle na waa dambi dhaafe naxariista.

وَإِن تَعُدُّوا۟ نِعْمَةَ ٱللَّهِ لَا تُحْصُوهَآ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَغَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٨﴾

Nicmooyinka Alle ugu nicmeeyey dadka waxaa ka mida badda hirka wayn ee haddana Alle u sakhiray dadka inay hilib cusub ka cunaan kalana soo baxaan jawhar iyo macaadin kala duwan oo xarrago iyo wax tar leh. Maraakiibtu iyo doonyuhuna dhex mushaaxi si dadku u doonaan fadliga Alle iyo rizqigiisa kuna mahdiyaan, waana wax Alle lagu mahdiyo in markab culays weyn ey biyuhu xambaaraan, waxaa kale oo nicmooyinka ka mida dhulka Alle noo goglay buurana ku sugay inayan iilan, wabiyaal iyo waddooyin lagu tooso oo lagu socdaalana yeelay, calaamooyinna yeelay iyo xiddigo lagu tooso. Markuu Alle xusay wax badan oo nicmooyinka ah yuu ku baraarujiyey awooddiisa oo in isaga uun la caabudo ay waajib tahay illeen isagaa wax abuura, waxa ka soo hadhayna wax ma abuuraan, waana inay saas ogaato ciddii wax xusuusan, nicmada Alle haddii la tiriyana lama koobi karo waxaase loo baahan yahay Alle ku mahdin iyo aqoonsi, Saciid iyo Xasan Basri waxay dheheen markuu Alle abuuray dhulka yuu gilgishay, markaasay malaa'igtii tidhi meel lagu sugnaan ma aha markaasaa waagu baryey iyadoo buuro leh. **[An-Naxl: 14-18].**

19. Alle waa og yahay waxaad qarsanaysaan iyo waxaad muujinaysaan.

وَٱللَّهُ يَعْلَمُ مَا تُسِرُّونَ وَمَا تُعْلِنُونَ ﴿١٩﴾

20. Waxay caabudayaan oo Alle ka soo hadhayna ma abuuraan waxba iyagaase la abuuraa.

وَٱلَّذِينَ يَدْعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ لَا يَخْلُقُونَ شَيْـًٔا وَهُمْ يُخْلَقُونَ ﴿٢٠﴾

أَمْوَٰتٌ غَيْرُ أَحْيَآءٍ ۖ وَمَا يَشْعُرُونَ أَيَّانَ يُبْعَثُونَ ﴿٢١﴾

21. Waana mayd aan noolayn mana oga waqtiga la soo bixin (uunka).

إِلَٰهُكُمْ إِلَٰهٌ وَٰحِدٌ ۚ فَٱلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِٱلْءَاخِرَةِ قُلُوبُهُم مُّنكِرَةٌ وَهُم مُّسْتَكْبِرُونَ ﴿٢٢﴾

22. Waxaa cibaado idinka mudan Ilaah kaliya, kuwa aan rumeynin aakhirana quluubtoodu way diidi (kalinimada Alle), wayna iskibrin.

لَا جَرَمَ أَنَّ ٱللَّهَ يَعْلَمُ مَا يُسِرُّونَ وَمَا يُعْلِنُونَ ۚ إِنَّهُۥ لَا يُحِبُّ ٱلْمُسْتَكْبِرِينَ ﴿٢٣﴾

23. Waxaa sugan in Alle og yahay waxay qarsan iyo waxay muujin Alle na ma jecla kuwa iskibriya.

وَإِذَا قِيلَ لَهُم مَّاذَآ أَنزَلَ رَبُّكُمْ ۙ قَالُوٓا۟ أَسَٰطِيرُ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿٢٤﴾

24. Marka lagu dhoho muxuu soo dejiyey Allihiin waxay dhahaan waa warkii kuwii hore.

لِيَحْمِلُوٓا۟ أَوْزَارَهُمْ كَامِلَةً يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ ۙ وَمِنْ أَوْزَارِ ٱلَّذِينَ يُضِلُّونَهُم بِغَيْرِ عِلْمٍ ۗ أَلَا سَآءَ مَا يَزِرُونَ ﴿٢٥﴾

25. Inay xambaaraan culayskooda «dambigooda» oo dhan maalinta qiyaame, iyo culayska «dambiga» kuway dhumiyeen cilmi la'aan, waxaana xun waxay xambaaranayaan.

Alle waxba kama qarsoona ama ha la qarsado ama ha la muujiyee, wax ka soo hadhay oo nooc cibaado, mutana ma jiro, ama ha la caabudo, ha la baryo, kaalmo ha la warsado, xukunkiisa ha la raaco, illeen Alle ayaa wax abuura waxa ka soo hadhayna wax ma abuuraane, waana mayd aan noolayn ogaynna marka qiyaamadu kici, Ilaahayna waa kali, gaalase ilaah kali ah ma rabto ee waxay rabaan in waxyaalo kale lala caabudo, maxay isla kibrin mar hadduu Alle wax walba og yahay, kuwa iskibriyana uusan jeclayn, oo marka quraanka la warsado dhaha waa warkii kuwii hore si ay u xambaaraan dambigoodii oo dhan iyo kii dadkay cilmi la'aan dhumiyeen, wax la xambaarana dambi baa u xun.

Xadiithna waxaa ku sugnaaday: in ciddii hanuun u yeedhana heli ajirkeeda iyo ajirka inta raacda iyagoon laga nusqaamin ajir, tii baadi u yeedhana waxay xambaari dambigeeda iyo dambiga inta raacday iyadoon iyana laga nusqaaminayn. Taasina waxay ka digi inaan dadka xumaanna la farin laguna raacin ee samo la faro laguna raaco. **[An-Naxl: 19-25].**

قَدْ مَكَرَ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ فَأَتَى ٱللَّهُ بُنْيَٰنَهُم مِّنَ ٱلْقَوَاعِدِ فَخَرَّ عَلَيْهِمُ

26. Waxaa wax dhagray kuwii ka horreyey markaasuu Alle (amarkiisii) uga yimid xagga

asaaska (tiirarka) waxaana kaga dumay saanqaafkii korkooda wuxuuna uga yimid cadaab meelayan ogayn.

فَأَتَى ٱللَّهُ بُنْيَٰنَهُم مِّنَ ٱلْقَوَاعِدِ فَخَرَّ عَلَيْهِمُ ٱلسَّقْفُ مِن فَوْقِهِمْ وَأَتَىٰهُمُ ٱلْعَذَابُ مِنْ حَيْثُ لَا يَشْعُرُونَ ﴿٢٦﴾

27. Ka dibna maalinta qiyaame wuu dullayn wuxuuna dhihi aaway shurakadaydii aad ku doodayseen dhexdeeda, kuwiina waxay dheheen cilmiga la siiyey (culimadii) dulli iyo xumaan maanta wuxuu saaran yahay gaalada.

ثُمَّ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ يُخْزِيهِمْ وَيَقُولُ أَيْنَ شُرَكَآءِىَ ٱلَّذِينَ كُنتُمْ تُشَٰٓقُّونَ فِيهِمْ ۚ قَالَ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْعِلْمَ إِنَّ ٱلْخِزْىَ ٱلْيَوْمَ وَٱلسُّوٓءَ عَلَى ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٢٧﴾

28. Ee ah kuway oofsan malaa'igtu iyagoo dulmiyey naftooda, waxayna muujiyaan hoggaansi iyagoo dhihi maannaan ahayn kuwo xumaan fala, saas ma aha ee Alle waa og yahay waxaad falayseen.

ٱلَّذِينَ تَتَوَفَّىٰهُمُ ٱلْمَلَٰٓئِكَةُ ظَالِمِىٓ أَنفُسِهِمْ ۖ فَأَلْقَوُا۟ ٱلسَّلَمَ مَا كُنَّا نَعْمَلُ مِن سُوٓءٍ ۚ بَلَىٰٓ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلِيمٌۢ بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٢٨﴾

29. Ee ka gala irridaha jahannamo idinkoo ku waari dhexdeeda waxaana xumaan badan hooyga kuwa iskibriya.

فَٱدْخُلُوٓا۟ أَبْوَٰبَ جَهَنَّمَ خَٰلِدِينَ فِيهَا ۖ فَلَبِئْسَ مَثْوَى ٱلْمُتَكَبِّرِينَ ﴿٢٩﴾

Alle wuxuu ka warramay inay kuwo hore oo gaalo ahaa dhagar faleen markaas Alle ku dumiyey guryihii, ciqaabna uga timid meelayna ka filayn, qiyaamadana ay la kulmi dulli iyo khasaare, waxna u tarayn waxay caabudayeen, oy ku qirina dadka culimada ah in uu dulli iyo xummani haleeli gaalada, oy malaa'igtu nafta ka qaadi iyagoo dulmiyey naftooda, isna dhiibay inkirayna inay horay xumaan u faleen Allese waa og yahay waxay faleen waxaana lagu abaal marin naar ay ku waaraan oo ah hooyga u xun ee loo darbay kuwa iskibriya, taasina waxay muujin in dhagartu ku noqon saaxiibkeed, in dulli u dambayn kuwa dhagra muslimiinta, inaan waxaan Alle ahayn wax tarayn, sharafta cilmiga lagu camal falo, in dulli u dambayn kuwa xaqa iska kibriya, in daalimiintu is dhiibi aakhiro, inayan waxba u tarayn xumaan diiddo maalinta qiyaame, saas darteed waa in laga faa'iidaysto waqtiga Alle na la caabudo. **[An-Naxl: 26-29].**

30. Waxaa lagu dhahaa kuwa dhawrsaday muxuu soo dejiyay Rabbigiin waxayna dhahaan

* وَقِيلَ لِلَّذِينَ ٱتَّقَوْا۟ مَاذَآ أَنزَلَ رَبُّكُمْ ۚ قَالُوا۟ خَيْرًا ۗ لِّلَّذِينَ أَحْسَنُوا۟ فِى

khayr, kuwa sama falay adduunyadana waxay mudan wanaag, daarta aakhiraana u khayr roon waxaana wanaag badan daarta mutaqiinta (kuwa dhawrsaday).

هَٰذِهِ ٱلدُّنْيَا حَسَنَةٌ ۚ وَلَدَارُ ٱلْآخِرَةِ خَيْرٌ ۚ وَلَنِعْمَ دَارُ ٱلْمُتَّقِينَ ﴿٣٠﴾

31. Waa jannada cadnin oy gali oy soconna dhexdeeda wabiyaashii waxayna ka heli waxay doonaan, saasuuna Alle ku abaal mariyaa kuwa dhawrsada.

جَنَّٰتُ عَدْنٍ يَدْخُلُونَهَا تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ ۖ لَهُمْ فِيهَا مَا يَشَآءُونَ ۚ كَذَٰلِكَ يَجْزِى ٱللَّهُ ٱلْمُتَّقِينَ ﴿٣١﴾

32. Ee ah kuway oofsato malaa'igtu iyagoo fiican (kuna dhihi) nabadgalyo korkiina ha ahaato ee ku gala jannada waxaad camal fali jirteen dartiis.

ٱلَّذِينَ تَتَوَفَّىٰهُمُ ٱلْمَلَٰٓئِكَةُ طَيِّبِينَ يَقُولُونَ سَلَٰمٌ عَلَيْكُمُ ٱدْخُلُوا۟ ٱلْجَنَّةَ بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٣٢﴾

33. Gaaladuse miyay sugi inay u timaado malaa'igtu mooyee ama u yimaado amarka Rabbigaa, saasayna faleen kuwii ka horreeyay, mana dulmiyin Alle iyagaase dulmiya naftooda.

هَلْ يَنظُرُونَ إِلَّآ أَن تَأْتِيَهُمُ ٱلْمَلَٰٓئِكَةُ أَوْ يَأْتِىَ أَمْرُ رَبِّكَ ۚ كَذَٰلِكَ فَعَلَ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ ۚ وَمَا ظَلَمَهُمُ ٱللَّهُ وَلَٰكِن كَانُوٓا۟ أَنفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ ﴿٣٣﴾

34. Waxaana ku dhacay xumaantii waxay faleen, waxaana ku dagay (ciqaabtii) waxay ku jees jeesi jireen.

فَأَصَابَهُمْ سَيِّـَٔاتُ مَا عَمِلُوا۟ وَحَاقَ بِهِم مَّا كَانُوا۟ بِهِۦ يَسْتَهْزِءُونَ ﴿٣٤﴾

Aayadaha hore waxay ka warrami xaalka kuwa Alle rumeeyey ee xumaanta ka dhawrsaday oo ah inay wanaag mudan adduun iyo aakhiroba, oy galina janno ay ku waari, kana heli waxay doonaan, saasaana Alle ku abaal mariyaa kuwa xumaanta ka dhawrsada oo malaa'igtu nafta ka qibloon iyagoo wanaagsan oy salaami uguna bishaarayn janno camalkoodi fiicnaa dartiis.

Gaalase waxay sugtaa waa halaag iyo Alloo amra ciqaabtooda, waana ciqaabtii haleeshay kuwii hore, ee naftooda dulmiyay illeen Alle wax ma dulmiyee, kuna dhacay oo koobay ciqaabtii camalkoodii xumaa ee xaq ku jees jees ahaa, cidii xaqa yasta oo iska kibrisa isagoon waxba ahayn ee miskiin tabar yar ah, waxse ismooda ha u adkaysto dulliga iyo ciqaabta haleeli hana ka kabbado khadhaadhka midhaha beertiisa ku miirmay. **[An-Naxl: 30-34].**

35. Waxay dhahaan kuwii Alle la wadaajiyay (cibaadada) hadduu doono Alle maannaan caabudneen cid ka soo hadhay waxba, annaga iyo aabbayaalkanno, mana xarrimneen isaga ka sokow waxba, saasayna faleen kuwii ka horreeyay, ee rasuullada ma saaran yahay waxaan gaadhsiin cad ahayn.

وَقَالَ ٱلَّذِينَ أَشۡرَكُواْ لَوۡ شَآءَ ٱللَّهُ مَا عَبَدۡنَا مِن دُونِهِۦ مِن شَيۡءٖ نَّحۡنُ وَلَآ ءَابَآؤُنَا وَلَا حَرَّمۡنَا مِن دُونِهِۦ مِن شَيۡءٖۚ كَذَٰلِكَ فَعَلَ ٱلَّذِينَ مِن قَبۡلِهِمۡۚ فَهَلۡ عَلَى ٱلرُّسُلِ إِلَّا ٱلۡبَلَٰغُ ٱلۡمُبِينُ ٣٥

36. Waxaan ka bixinay ummad kasta rasuul inay caabudaan Alle kana dheeraadaan dhaaquutka (cibaadada Alle ka sokow), waxaana ka mida dadka cid Alle hanuuniyay, waxaana ka mida ciday ku sugnaatay baadinnimo, ee socda dhulka oo eega siday noqotay cidhibtii beeniyayaasha.

وَلَقَدۡ بَعَثۡنَا فِي كُلِّ أُمَّةٖ رَّسُولًا أَنِ ٱعۡبُدُواْ ٱللَّهَ وَٱجۡتَنِبُواْ ٱلطَّٰغُوتَۖ فَمِنۡهُم مَّنۡ هَدَى ٱللَّهُ وَمِنۡهُم مَّنۡ حَقَّتۡ عَلَيۡهِ ٱلضَّلَٰلَةُۚ فَسِيرُواْ فِي ٱلۡأَرۡضِ فَٱنظُرُواْ كَيۡفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلۡمُكَذِّبِينَ ٣٦

37. Haddaad ku dadaashid hanuunkooda Alle ma hanuuniyo ciduu dhumiyay mana helaan gargaare.

إِن تَحۡرِصۡ عَلَىٰ هُدَىٰهُمۡ فَإِنَّ ٱللَّهَ لَا يَهۡدِي مَن يُضِلُّۖ وَمَا لَهُم مِّن نَّٰصِرِينَ ٣٧

Gaalada iyo dad badan oo jaahiliina way khaldamaan oo u xujaystaan dhumiddooda qaddarka Alle iyagoo sheegan inuu hadduusan Alle doonin ayna iyaga iyo aabayaalkood xarrimeen wax bannaan, caabuddeenna wax Alle ka soo hadhay, waana waxay fali jireen kuwii horana, rasuulladana waxaan gaadhsiin ahayn ma saarra, waa jirtaa in Alle maamulo adduunka laakiin cid walba wuxuu siiyey caqli oy ku kala doorato xumaanta iyo samaanta, rasuullana wuu u soo diray kutubna wuu u soo dejiyey cudur daarna ma jiro, waana Alle kaliya in la caabudo lagana fogaado cibaadada baadhilka Alle ka soo hadhay waxay dooni ha ahaatee, ciddii doontana Alle wuu sii hanuuniyaa, tii xaqa diidda inta loogu yeedhana way sii dhuntaa, cid Alle mooyee wax hanuuninna ma jirto. Saas darteed mar hadduu Alle xaqii caddeeyey, jidkiina muuqdo, cid kastana rasuul loo diray way dhammaatay lug geed ku mar iyo kanay tahay iyo wax la caabudo oo Alle ka soo hadhay ee waa in uun xaqa la raaco loona hoggaansamo Alle. **[An-Naxl: 35-37].**

38. Waxay ugu dhaarteen Alle dhaar adag inuusan soo bixinayn Alle cid dhimatay saas ma aha ee waa yabooh Alle isa saaray (oo sugan), dadka badidiise ma oga.

وَأَقْسَمُوا۟ بِٱللَّهِ جَهْدَ أَيْمَٰنِهِمْ لَا يَبْعَثُ ٱللَّهُ مَن يَمُوتُ ۚ بَلَىٰ وَعْدًا عَلَيْهِ حَقًّا وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٣٨﴾

39. Inuu u caddeeyo waxay isku diidan yihiin iyo inay ogaadaan kuwii gaaloobay inay ahaayeen beenaalayaal.

لِيُبَيِّنَ لَهُمُ ٱلَّذِى يَخْتَلِفُونَ فِيهِ وَلِيَعْلَمَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓا۟ أَنَّهُمْ كَانُوا۟ كَٰذِبِينَ ﴿٣٩﴾

40. Haddaan doonno arrinna waa inaan uun ku dhahno ahow oy ahaato.

إِنَّمَا قَوْلُنَا لِشَىْءٍ إِذَآ أَرَدْنَٰهُ أَن نَّقُولَ لَهُۥ كُن فَيَكُونُ ﴿٤٠﴾

41. Kuwii u haajiray dar Alle intii la dulmiyey ka dib waxaan dejinaynaa adduunka wanaag, ajirka aakhiraana ka wayn hadday wax ogyihiin.

وَٱلَّذِينَ هَاجَرُوا۟ فِى ٱللَّهِ مِنۢ بَعْدِ مَا ظُلِمُوا۟ لَنُبَوِّئَنَّهُمْ فِى ٱلدُّنْيَا حَسَنَةً ۖ وَلَأَجْرُ ٱلْءَاخِرَةِ أَكْبَرُ ۚ لَوْ كَانُوا۟ يَعْلَمُونَ ﴿٤١﴾

42. Waana kuwa samray «adkaystay» Rabbigoodna uun tala saarta.

ٱلَّذِينَ صَبَرُوا۟ وَعَلَىٰ رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ ﴿٤٢﴾

Gaaladii waxay dhaar adag ku dhaarteen inaan Alle soo bixinayn cid dhimatay, wuuse soo bixin siduu yaboohay, mase oga dadka badankiisa jaahiliinta ah, illeen wax wabla waqti iyo mudduu leeyahaye, inuu u caddayn waxay isku diiddanaayeen ogaadaanna kuwii gaaloobay inay beenaalayaal ahaayeen oo waxay addunka ku hayeen gaaladu iyo xaq diidayaashu been la dhoodhoobay ahayd, dhabta iyo runtuna tahay waxa Alle yaboohay rasuulladuna rumeeyeen, Alle na wuxuu doono in ay ahaadaan wuxuu dhahaa ahaw wuuna ahaadaa, wax ku culusna ma jiro.

Kuwa dar Alle u hijrooday wuxuu Alle u ballanqaaday inuu wanaag siiyo adduun iyo aakhiraba, iyadoo abaal marinta aakhiro iyo ajrigeedu ka wayn yahay kan adduun, waxaana muta kuwa samray oo u adkaysta dhibka, Rabbigoodna tala saarta, wuxuuna ahaa Cumar binu Khadhaab markuu muhaajiriinta wax siin kii yiraahdaa: qaado Alle hakuu barakeeyee, kani waa wuxuu Alle kuu yaboohay adduunkee, wuxuu kuu kaydiyay aakhiraana ka fiicane, markaasuu akhriyay aayadan.

Taasina waxay ku tusin wanaagga iyo fadliga hijrada dar Alle iyo in Alle wanaag ku abaal marin. **[An-Naxl: 38-42].**

43. Waxaan dirray hortaa rag aan u waxyoonnay, ee warsada kuwa cilmiga leh haddaydaan wax ogayn.

وَمَآ أَرۡسَلۡنَا مِن قَبۡلِكَ إِلَّا رِجَالٗا نُّوحِيٓ إِلَيۡهِمۡۖ فَسۡـَٔلُوٓاْ أَهۡلَ ٱلذِّكۡرِ إِن كُنتُمۡ لَا تَعۡلَمُونَ ﴿٤٣﴾

44. (Waxaana la dirray) xujooyin iyo kutub waxaanna kugu soo dejinnay quraanka inaad u caddayso dadka waxa loo soo dejiyey, inay fikiraan.

بِٱلۡبَيِّنَٰتِ وَٱلزُّبُرِۗ وَأَنزَلۡنَآ إِلَيۡكَ ٱلذِّكۡرَ لِتُبَيِّنَ لِلنَّاسِ مَا نُزِّلَ إِلَيۡهِمۡ وَلَعَلَّهُمۡ يَتَفَكَّرُونَ ﴿٤٤﴾

45. Ma aamin bay ka noqdeen kuwii dhagarta falay in Alle la gooyo dhulka, ama uga yimaaddo cadaab meelayna filayn.

أَفَأَمِنَ ٱلَّذِينَ مَكَرُواْ ٱلسَّيِّـَٔاتِ أَن يَخۡسِفَ ٱللَّهُ بِهِمُ ٱلۡأَرۡضَ أَوۡ يَأۡتِيَهُمُ ٱلۡعَذَابُ مِنۡ حَيۡثُ لَا يَشۡعُرُونَ ﴿٤٥﴾

46. Ama ku qabto Alle gadgaddoonkooda mana aha kuwa Alle daaliya.

أَوۡ يَأۡخُذَهُمۡ فِي تَقَلُّبِهِمۡ فَمَا هُم بِمُعۡجِزِينَ ﴿٤٦﴾

47. Ama ku qabto nusqaamin (tartiib tartiib ah) iyagoo ku sugan, (ilaa ay ka halaagsamaan) Rabbigiinna waa u ture naxariista.

أَوۡ يَأۡخُذَهُمۡ عَلَىٰ تَخَوُّفٖ فَإِنَّ رَبَّكُمۡ لَرَءُوفٞ رَّحِيمٌ ﴿٤٧﴾

Gaaladu waxay wax badan inkireen in rasuul dada la diro, saas darteed yaa Alle ku raddiyey aayado badan, haddayna wax aqoonna oo ogaynna waa inay warsadaan dadka cilmiga leh. Alle na wuxuu soo dejiyey xujooyin iyo kutub, Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) Alle wuxuu ku soo dejiyey quraanka si uu ugu caddeeyo dadka waxa lagu soo dejiyey iyo inay fikiraan, aamminna kama aha gaaladu in Alle dhulka la gooyo ama cadaab uga yimaaddo meelayna ogayn, ama Alle qabto iyagoo gadgadoomi mana daaliyaan Alle, ama Alle ku qabto nusqaan tartiib tartiibah, Alle na waa u ture naxariista, siduu Rasuulku yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): Alle wax kaga samir badan dhib uu maqlay ma jiro, waxay ku sheegi ilmo isna wuu arzaaqi oo caafin. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim. Ruuxii caqli lehse waa inuusan ku kadsoomin ee Alle ka dhawrsdaa dhabna u caabudaa. **[An-Naxl: 43-47].**

48. Miyeyna arkayn wuxuu Alle abuuray oo u iilan hooskiisu midig iyo bidix sujuud Alle dartiis iyagoo u khushuucsan.

أَوَلَمۡ يَرَوۡاْ إِلَىٰ مَا خَلَقَ ٱللَّهُ مِن شَيۡءٖ يَتَفَيَّؤُاْ ظِلَٰلُهُۥ عَنِ ٱلۡيَمِينِ وَٱلشَّمَآئِلِ سُجَّدٗا لِّلَّهِ وَهُمۡ دَٰخِرُونَ ﴿٤٨﴾

وَلِلَّهِ يَسْجُدُ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلْأَرْضِ مِن دَآبَّةٍ وَٱلْمَلَٰٓئِكَةُ وَهُمْ لَا يَسْتَكْبِرُونَ ﴿٤٩﴾

49. Alle waxaa u sujuuda waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan oo dhul socoda iyo malaa'ig iskamana wayneeyaan (sujuuddiisa).

يَخَافُونَ رَبَّهُم مِّن فَوْقِهِمْ وَيَفْعَلُونَ مَا يُؤْمَرُونَ ﴿٥٠﴾

50. Waxayna ka cabsan Rabbigooda sarreeya waxayna falaan waxa la faro.

* وَقَالَ ٱللَّهُ لَا تَتَّخِذُوٓاْ إِلَٰهَيْنِ ٱثْنَيْنِ ۖ إِنَّمَا هُوَ إِلَٰهٌ وَٰحِدٌ ۖ فَإِيَّٰيَ فَٱرْهَبُونِ ﴿٥١﴾

51. Wuxuuna yidhi Alle ha yeelannina ilaahyo labo ah, Alle waa uun ilaah kaliya ee aniga uun iga cabsada.

وَلَهُۥ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَلَهُ ٱلدِّينُ وَاصِبًا ۚ أَفَغَيْرَ ٱللَّهِ تَتَّقُونَ ﴿٥٢﴾

52. Alle waxaa u sugnaaday waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan, waxaana u sugnaaday diin (cibaado) joogta ah, ee ma Alle cidaan ahayn yaad ka dhawrsanaysaan.

وَمَا بِكُم مِّن نِّعْمَةٍ فَمِنَ ٱللَّهِ ۖ ثُمَّ إِذَا مَسَّكُمُ ٱلضُّرُّ فَإِلَيْهِ تَجْـَٔرُونَ ﴿٥٣﴾

53. Waxa nicma ah ood haysataan waxay ka timid Alle, markuu idin taabsiiyo dhibna xaggiisaad u qaylyeysaan.

ثُمَّ إِذَا كَشَفَ ٱلضُّرَّ عَنكُمْ إِذَا فَرِيقٌ مِّنكُم بِرَبِّهِمْ يُشْرِكُونَ ﴿٥٤﴾

54. Markuu idinka faydo dhibkana koox idinka mida yaa Rabbigood la wadaajisa (cibaadada).

لِيَكْفُرُواْ بِمَآ ءَاتَيْنَٰهُمْ ۚ فَتَمَتَّعُواْ فَسَوْفَ تَعْلَمُونَ ﴿٥٥﴾

55. Inay ka gaaloobaan waxaan siinnay, raaxaysta waad ogaan doontaan «cidhibta xaalkiinnee».

Ibnu Kathiir wuxuu yidhi: Alle wuxuu ka warrami waynidiisa oo wax kasta u khushuuco dhammaan, wax nool iyo wax kalaba iyo insi, jinni iyo malaa'igba, oo xataa hoosku Alle u sujuudo, malla'igtuna fulin amarka Alle, kana cabsan, iyo inaan ilaahay mooyee Alle kale oo xaq lugu caabudo jirin, isaga kaliyana muto cibaado, illeen isagaa wax walbaba lehe, cibaado joogta ahna mudane, tan kale wixii nicma ah oo la haysto xagga Alle ayay ka timid, Alle ayaana

dhibka fayda oyna xaq tahay in kaligiis la caabudo, gaalase way diiday ee ha ku raaxaysteen waxa Alle siiyey way ogaan waxa ku dhaca. Mahad Alle ayaa mudan, waynaynna isagaa xaq u leh, isagaana lagu hoos jiraa aakhiro iyo aduunba, amarkiisuna fuli. **[An-Naxl: 48-55].**

وَيَجْعَلُونَ لِمَا لَا يَعْلَمُونَ نَصِيبًا مِّمَّا رَزَقْنَٰهُمْ ۗ تَٱللَّهِ لَتُسْـَٔلُنَّ عَمَّا كُنتُمْ تَفْتَرُونَ ﴿٥٦﴾

56. Waxay u yeelaan waxayna ogayn qayb waxaan ku arzaaqnay ka mida, dhaar Alle e waa laydin warsan (gaaloy) waxaad been abuuranayseen.

وَيَجْعَلُونَ لِلَّهِ ٱلْبَنَٰتِ سُبْحَٰنَهُۥ وَلَهُم مَّا يَشْتَهُونَ ﴿٥٧﴾

57. Waxayna u yeelaan Alle gabdho waa ka nasahan yahay, iyaguna waxay yeelan waxay rabaan.

وَإِذَا بُشِّرَ أَحَدُهُم بِٱلْأُنثَىٰ ظَلَّ وَجْهُهُۥ مُسْوَدًّا وَهُوَ كَظِيمٌ ﴿٥٨﴾

58. Marka loogu bishaareeyo midkood dhaddig wuxuu noqdaa wajigiisu madow walbahaarina.

يَتَوَٰرَىٰ مِنَ ٱلْقَوْمِ مِن سُوٓءِ مَا بُشِّرَ بِهِۦٓ ۚ أَيُمْسِكُهُۥ عَلَىٰ هُونٍ أَمْ يَدُسُّهُۥ فِى ٱلتُّرَابِ ۗ أَلَا سَآءَ مَا يَحْكُمُونَ ﴿٥٩﴾

59. Wuxuuna iska qariyaa dadka xumida waxa loogu bishaareeyey, miyuu ku haystaa dulli mise wuxuu dhumbiyaa dhulka, waxaa xun waxay xukumi.

لِلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِٱلْءَاخِرَةِ مَثَلُ ٱلسَّوْءِ ۖ وَلِلَّهِ ٱلْمَثَلُ ٱلْأَعْلَىٰ ۚ وَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿٦٠﴾

60. Kuwaan rumayn aakhiro waxaa u sugnaaday tusaale xun, Alle na waxaa u sugnaaday sifada sare, waana adkaade falsan.

Waxaa ka mida caadada xun ee gaalada inay xoolahooda kala qaybiyaan oo qaarna Alle ku sheegaan qaarna shurakadooda, waase la warsan been abuurashadooda, sidoo kale waxay Alle ku sheegaan gabdho iyaguna waxay doonaan oo wiilal ah, Allase waa ka nasahan yahay waxay sheegi, iyadoo marka mid ka mida loogu bishaareeye gabadh uu wajigiisu doorsoomo walbahaarana, kana qarsoomo oo ka dhawrsado dadka isagoo ka xun waxa loogu bishaareeyey, kuna fikiri ma dulli buu ku hayaa mise wuu dilaa oo dhulka ku xabaalaa, waxayna xukumayaan wax xun, dhabtuna waa in kuwaan aakhirada rumayn tusaale xun u sugnaaday, Alle na sarrayn, wanaag iyo wayni u sugnaatay, yahayna mid awood iyo falsami ku sifoobay. Aayaduhuna waxay sugi in cibaadada khalqiga iyo xukunka dhammaan Alle iska leeyahay, uuna u baahnayn ilmo iyo kaalmo, inay jaahiliyo tahay gabdho la silciyo ama

la gacan bidixeeyo, in wanaagga oo dhanna Alle ku dhammaado, xumaan, dulli iyo liidmana gaalo ku dhammaado, ee dhab ha loo caabudo Allahaas. **[An-Naxl: 56-60].**

وَلَوْ يُؤَاخِذُ ٱللَّهُ ٱلنَّاسَ بِظُلْمِهِم مَّا
تَرَكَ عَلَيْهَا مِن دَآبَّةٍ وَلَٰكِن يُؤَخِّرُهُمْ
إِلَىٰٓ أَجَلٍ مُّسَمًّى ۖ فَإِذَا جَآءَ أَجَلُهُمْ لَا
يَسْتَـْٔخِرُونَ سَاعَةً وَلَا يَسْتَقْدِمُونَ ﴿٦١﴾

61. Hadduu Alle u qaban dadka dulmigooda kagama tageen korka dhulka wax socda, wuxuuse dib ugu dhigi muddo magacaaban, markay ajashoodu timaadana kama dib maraan saacad kamana hor maraan.

وَيَجْعَلُونَ لِلَّهِ مَا يَكْرَهُونَ ۖ وَتَصِفُ
أَلْسِنَتُهُمُ ٱلْكَذِبَ أَنَّ لَهُمُ ٱلْحُسْنَىٰ ۚ لَا
جَرَمَ أَنَّ لَهُمُ ٱلنَّارَ وَأَنَّهُم مُّفْرَطُونَ ﴿٦٢﴾

62. Waxayna u yeelaan Alle waxay nacayaan, waxayna tilmaami carrabyadoodu been inuu wanaag u sugnaaday, waxaa sugan in naar uun u sugnaatay, oo loo hormarin (luguna dhaafi).

تَٱللَّهِ لَقَدْ أَرْسَلْنَآ إِلَىٰٓ أُمَمٍ مِّن قَبْلِكَ
فَزَيَّنَ لَهُمُ ٱلشَّيْطَٰنُ أَعْمَٰلَهُمْ فَهُوَ
وَلِيُّهُمُ ٱلْيَوْمَ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٦٣﴾

63. Dhaar Alle e waxaan (rasuullo) u dirray umado kaa horreeyey wuxuuna u qurxiyey shaydaan camalkooda isagaana sokeeye u ah maanta waxayna mudan cadaab daran.

وَمَآ أَنزَلْنَا عَلَيْكَ ٱلْكِتَٰبَ إِلَّا لِتُبَيِّنَ
لَهُمُ ٱلَّذِى ٱخْتَلَفُوا۟ فِيهِ وَهُدًى وَرَحْمَةً
لِّقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴿٦٤﴾

64. Quraankana waxaa uun kuugu soo dejinay inaad u caddaysid dadka waxay isku khilaafsan yihiin iyo hanuunka iyo naxariista ciddii rumayn.

وَٱللَّهُ أَنزَلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَأَحْيَا بِهِ
ٱلْأَرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَآ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَةً
لِّقَوْمٍ يَسْمَعُونَ ﴿٦٥﴾

65. Alle na waa kan ka soo dejiya samada biyo, kuna nooleeya dhulka abaar ka dib, arrintaasna calaamad yaa ugu sugan ciddii wax maqli.

Aayadahan waxay ka warrami dusha Alle iyo in hadduu dadka u qaban dulmigooda aan dhulka ciduna ku noolaateen, wuxuuse dib ugu dhigaa muddo magacaaban markay timaadana saacad dib loogama dhaco lagamana

hor maro, gaaladuna Alle wax xun yey ku sheegeen, beenna waxay ku sheegi in wanaaggu iyaga u sugnaaday, waxaase dhaba in naaru u sugnaatay loona hor marin, waana jirtaa in Alle u diray rasuullo ummadahooda, shaydaanna u qurxiyey camalkooda, isagaana qiyaamada sokeeye u ah, cadaab daranna way mudan, quraankana wuxuu Alle ugu soo dejiyey Nabiga inuu dadka u caddeeyo waxay isku diidan yihiin iyo isagoo hanuun iyo naxariis u ah ciddii xaq rumayn, uguna deeqay dadka roob iyo khayr uu ku nooleeyo dhulka abaar ka dib waana waxay ku waano qaadato ciddii wax maqli, saas darteed dusha Alle iyo naxariistiisa yaan lagu kadsoomin wuu ciqaab iyo qabasho daran yahaye. **[An-Naxl: 61-65].**

وَإِنَّ لَكُمْ فِي ٱلْأَنْعَٰمِ لَعِبْرَةً ۖ نُّسْقِيكُم مِّمَّا فِي بُطُونِهِۦ مِنۢ بَيْنِ فَرْثٍ وَدَمٍ لَّبَنًا خَالِصًا سَآئِغًا لِّلشَّٰرِبِينَ ﴿٦٦﴾

66. Waxaana idiinku sugan xoolaha cibrad (waano qaadasho) waxaanna idinka waraabinnaa waxa ku sugan caloosheed digo iyo dhiig dhexdooda ah caano saafi ah oo u fudud kuwa cabbi.

وَمِن ثَمَرَٰتِ ٱلنَّخِيلِ وَٱلْأَعْنَٰبِ تَتَّخِذُونَ مِنْهُ سَكَرًا وَرِزْقًا حَسَنًا ۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَءَايَةً لِّقَوْمٍ يَعْقِلُونَ ﴿٦٧﴾

67. Iyo midhaha timirta iyo cinabka ood ka yeelataan cabbid xalaal ah iyo risqi fiican (sakarka halkan khamriga looma jeedo), arrintaasna calaamad baa ugu sugan ciddii wax kasi.

وَأَوْحَىٰ رَبُّكَ إِلَى ٱلنَّحْلِ أَنِ ٱتَّخِذِى مِنَ ٱلْجِبَالِ بُيُوتًا وَمِنَ ٱلشَّجَرِ وَمِمَّا يَعْرِشُونَ ﴿٦٨﴾

68. Wuxuu u waxyooday (ku ilhaameeyey) Allehaa shinnida ka yeelo buuraha guryo iyo geedaha iyo waxay dhistaan.

ثُمَّ كُلِى مِن كُلِّ ٱلثَّمَرَٰتِ فَٱسْلُكِى سُبُلَ رَبِّكِ ذُلُلًا ۚ يَخْرُجُ مِنۢ بُطُونِهَا شَرَابٌ مُّخْتَلِفٌ أَلْوَٰنُهُۥ فِيهِ شِفَآءٌ لِّلنَّاسِ ۗ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَءَايَةً لِّقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ ﴿٦٩﴾

69. Markaas cun midho kasta xaggooda qaadna jidadka Allehaa oo laylyan, waxaana ka soo baxa calooshooda cabbiday kala duwan tahay midabkoodu dhexdiisana waxaa ah daawo dadka, arrintaasna calaamaa ugu sugan ciddii fikiri.

وَٱللَّهُ خَلَقَكُمْ ثُمَّ يَتَوَفَّىٰكُمْ ۚ وَمِنكُم مَّن يُرَدُّ إِلَىٰٓ أَرْذَلِ ٱلْعُمُرِ لِكَىْ لَا يَعْلَمَ

70. Alle ayaa idin abuuray markaas idin oofsan (dili), waxaana idinka mida cid loo celin (la gaadhsiin)

cimriga ugu liita inuusan ogaan waxba cilmi «ogaansho» dabadiis, Alle na wax walba waa og yahay karaana.

بَعۡدَ عِلۡمٖ شَيۡـٔٗاۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلِيمٞ قَدِيرٞ ٧٠

Xoolaha nicmoolayda ah waxaa ku sugan calaamad ku tusin qudradda Alle, sida Alle innooga siiyo caano saafi ah oo ka soo dhex baxay uus iyo dhiig, macaanna oo cunaha cabbaha u sahlan, iyo ciddii dhami, sidoo kale wuxuu ina siiyey oo midho timireed iyo canab aan ka yeelanno cunno fiican oo tusin ciddii caqli leh awoodda Alle iyo naxariistiisa, sidoo kale wuxuu ku ilhaameeyey shinnida oo ah duulaa yar inay guri ka yeelato buuraha, geedaha iyo dhista, oyna cunto midho kala duwan, qaaddana meelo iyo jidad Alle u sahlay, kana soo baxo caloosheeda cabbid midabkeedu kala duwan yahay, daawana dadka ugu sugan tahay, taasina waa calaamad ku tusin awoodda Alle ciddii fikiri, saasaadna u aragtaa sida Alle dadka ugu nicmeeyey xoolo ay caano ka dhammaan, midho ay wax ka cunaan, shinni malab u samaysa, waana xayawaankaas tabarta yar, yaa macaaneeyey dhaacaankeeda? Alle kaliya. Waxaana sugnaatay in nin u yimid Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) una sheegay in walaalkiis shubmi, kuna yidhi: malab waraabi, kuna soo noqnoqday dhawr jeer isagoo sheegi inuu wali shubmi markaa kuna yidhi: waraabi malab, Alle ayaa run sheegi, caloosha walaalkaana waa beenaleeye, markaasuu waraabiyey ka dibna bogsaday. Taasina waxay ku tusin in Alle u sakhiray dadka in wax badan u adeegaan una shaqeeyaan si Alle loogu mahdiyo. **[An-Naxl: 66-70].**

71. Alle wuu ka fadilay qaarkiin qaar risqiga, mana aha kuwa la fadilay kuwii ku celiya risqigooda waxay gacantoodu hanato oy isku mid ku noqdaan ee ma nicmada Alle ayaad diidaysaan.

وَٱللَّهُ فَضَّلَ بَعۡضَكُمۡ عَلَىٰ بَعۡضٖ فِي ٱلرِّزۡقِۚ فَمَا ٱلَّذِينَ فُضِّلُواْ بِرَآدِّي رِزۡقِهِمۡ عَلَىٰ مَا مَلَكَتۡ أَيۡمَٰنُهُمۡ فَهُمۡ فِيهِ سَوَآءٌۚ أَفَبِنِعۡمَةِ ٱللَّهِ يَجۡحَدُونَ ٧١

72. Alle wuxuu idiinka yeelay naftiinna azwaaj wuxuuna idiinka yeelay haweenkiinna wiilal iyo waxay sii dhaleen, idinkuna arsaaqay wanaag, ma baadhil bay rumayn oy nicmada Alle ayay ka gaaloobi.

وَٱللَّهُ جَعَلَ لَكُم مِّنۡ أَنفُسِكُمۡ أَزۡوَٰجٗا وَجَعَلَ لَكُم مِّنۡ أَزۡوَٰجِكُم بَنِينَ وَحَفَدَةٗ وَرَزَقَكُم مِّنَ ٱلطَّيِّبَٰتِۚ أَفَبِٱلۡبَٰطِلِ يُؤۡمِنُونَ وَبِنِعۡمَتِ ٱللَّهِ هُمۡ يَكۡفُرُونَ ٧٢

73. Waxayna caabudayaan Alle ka sokow waxaan uga hananayn risqi samooyinka iyo dhulka waxba, waxna karin.

وَيَعۡبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ مَا لَا يَمۡلِكُ لَهُمۡ رِزۡقٗا مِّنَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ شَيۡـٔٗا وَلَا يَسۡتَطِيعُونَ ٧٣

74. Ee haw yeelina Alle wax la mida, Alle wuu og yahay idinkuse ma ogidine.

فَلَا تَضْرِبُوا۟ لِلَّهِ ٱلْأَمْثَالَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ يَعْلَمُ وَأَنتُمْ لَا تَعْلَمُونَ ﴿٧٤﴾

Alle ayaa wax abuura dilana, dadna cimrisiiya intay ka gaadhaan gabow daran oyna waxba kala kasin, oo ah da'duu Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) Alle ka magan galay kuna yidhi: Allow waxaan kaa magan gali bakhaylnimo, wahsi, duqnimo, iyo in la ii celiyo cimriga u xun iyo cadaabka qabriga iyo fidnada Dajaal iyo fidnada nolosha iyo tan geerida. Waxaa wariyay Bukhaari. Tan kale waxay muujin doqonnimada gaalada oo ah inay Alle addoommadiisa shariig uga yeelaan, mana eka, sidayna iyaga iyo waxay hantaan u sinnayn, taasina waa nicmo Alle diid, tan kale in Alle isu abuuray rag iyo haween markay is guursadaanna kala siiya carruur iyo farac, dadkana ku arsaaqa wanaag.

Ma waxayse rumayn baadhil iyo xumaan oy ka gaaloobi nicmada Alle, oy caabudi Alle ka sokow waxaan rizqi ugu hananayn cirka iyo dhulka, waxna karin xaqna ma aha in Alle loo yeelo tusaale xun oo lagu shabbaho wax, oo lala simo, illeen waxbuu og yahay, dadkuna wax ma ogee, Alle ayaa xaqa, awood leh, xukun leh, caddaalad leh, wax nooleeya waxna dila xagiisana loo ahaan. **[An-Naxl: 71-74].**

75. Alle wuxuu ka yeelay tusaale addoon la leeyahay oon waxba karin iyo ruux aannu ku arzaaqnay rizqi fiican oo u bixin qarsoodi iyo muuqaalba, ma isku mid baa, mahad Alle ayaa iska leh, badankooduse wax ma oga.

۞ ضَرَبَ ٱللَّهُ مَثَلًا عَبْدًا مَّمْلُوكًا لَّا يَقْدِرُ عَلَىٰ شَىْءٍ وَمَن رَّزَقْنَٰهُ مِنَّا رِزْقًا حَسَنًا فَهُوَ يُنفِقُ مِنْهُ سِرًّا وَجَهْرًا ۖ هَلْ يَسْتَوُۥنَ ۚ ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ ۚ بَلْ أَكْثَرُهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٧٥﴾

76. Waxaa (kale) oo Alle tusaale ka yeelay laba nin oo midkood af la' yahay (ma hadle) waxna karin dhibna ku ah (culays) ilaaliyihiisa meel kastoo uu ujeediyana aan wanaag ka imanaynin ma eg yihiin isaga iyo ruux fari caddaaladda jid toosanna ku sugan.

وَضَرَبَ ٱللَّهُ مَثَلًا رَّجُلَيْنِ أَحَدُهُمَآ أَبْكَمُ لَا يَقْدِرُ عَلَىٰ شَىْءٍ وَهُوَ كَلٌّ عَلَىٰ مَوْلَىٰهُ أَيْنَمَا يُوَجِّههُّ لَا يَأْتِ بِخَيْرٍ ۖ هَلْ يَسْتَوِى هُوَ وَمَن يَأْمُرُ بِٱلْعَدْلِ وَهُوَ عَلَىٰ صِرَٰطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿٧٦﴾

77. Alle ayaa iska leh waxa ku maqan samooyinka iyo dhulka, saacadda amarkeeduna ma aha ilbidhiqsigeed mooyee ama ka dhaw, Alle na wax kasta wuu karaa.

وَلِلَّهِ غَيْبُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ وَمَآ أَمْرُ ٱلسَّاعَةِ إِلَّا كَلَمْحِ ٱلْبَصَرِ أَوْ هُوَ أَقْرَبُ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿٧٧﴾

78. Alle wuxu idinka soo bixiyay caloosha hooyooyinkiin waxba idinkoon ogayn wuxuuna idiin yeelay maqal iyo arag iyo quluub inaad ku shukridaan Alle.

وَٱللَّهُ أَخْرَجَكُم مِّنۢ بُطُونِ أُمَّهَٰتِكُمْ لَا تَعْلَمُونَ شَيْـًٔا وَجَعَلَ لَكُمُ ٱلسَّمْعَ وَٱلْأَبْصَٰرَ وَٱلْأَفْـِٔدَةَ لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿٧٨﴾

79. Miyayna arkayn shinbiraha loo sakhiray hawada samada, waxaana Alle ahayna haynin, taasina calaamooyin yaa ugu sugan ciddii rumayn (xaqa).

أَلَمْ يَرَوْا۟ إِلَى ٱلطَّيْرِ مُسَخَّرَٰتٍ فِى جَوِّ ٱلسَّمَآءِ مَا يُمْسِكُهُنَّ إِلَّا ٱللَّهُ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَـَٔايَٰتٍ لِّقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴿٧٩﴾

Waa tusaalayaal Alle u yeelay muslimka iyo gaalka, oo ah inayna sinnayn cid tasarrufi oo wax bixin iyo midaan waxba karin, iyo midaan hadlayn culaysna ku ah dadkuu la nool yahay wanaagna laga sugayn iyo mid wanaagga fari oo jidka toosan ku socda, tan kale Alle ayaa iska leh waxa ku qarsoon cirka iyo dhulka, dhicidda qiyaamana waa uun ilbidhiqsi ama ka dhaw, illeen Alle ayaa wax kasta karee, waana kan dadka ka soo saaray uurka hooyo iyagoo jaahiliina oon wax aqoon una yeelay maqal, arag iyo caqli si ay Alle ugu aqoonsadaan uguna mahadiyaan.

Tan kale waxaa ka mida awooddiisa shinbiraha ku duuli hawada cirka waxaan Alle ahaynna haynin, waxaasoo dhanna waxay dadka ku waajibin Alle aqoonsi iyo cibaadadiisa dhabta ah. **[An-Naxl: 75-79].**

80. Alle wuxuu idiinka yeelay guryihiinna xasil (deegaan) wuxuuna idiinka yeelay harkaha xoolaha guryo idiin fudud maalinta geeddiga iyo maalinta nagaadigaba, idiinkana yeelay suufkeeda iyo dhogarta (geela) iyo dhogorta (riyaha) alaab iyo maacuun tan iyo muddo.

وَٱللَّهُ جَعَلَ لَكُم مِّنۢ بُيُوتِكُمْ سَكَنًا وَجَعَلَ لَكُم مِّن جُلُودِ ٱلْأَنْعَٰمِ بُيُوتًا تَسْتَخِفُّونَهَا يَوْمَ ظَعْنِكُمْ وَيَوْمَ إِقَامَتِكُمْ وَمِنْ أَصْوَافِهَا وَأَوْبَارِهَا وَأَشْعَارِهَآ أَثَٰثًا وَمَتَٰعًا إِلَىٰ حِينٍ ﴿٨٠﴾

وَٱللَّهُ جَعَلَ لَكُم مِّمَّا خَلَقَ ظِلَٰلًا وَجَعَلَ لَكُم مِّنَ ٱلْجِبَالِ أَكْنَٰنًا وَجَعَلَ لَكُمْ سَرَٰبِيلَ تَقِيكُمُ ٱلْحَرَّ وَسَرَٰبِيلَ تَقِيكُم بَأْسَكُمْ ۚ كَذَٰلِكَ يُتِمُّ نِعْمَتَهُۥ عَلَيْكُمْ لَعَلَّكُمْ تُسْلِمُونَ ﴿٨١﴾

81. Alle wuxuu idiinka yeelay wuxuu abuuray (geedaha) hadh, wuxuuna idiinka yeelay buuraha duggaal, idiinkana yeelay dhar idinka dhawra kulaylka iyo qamiis bireed idinka dhawrta (dhibka) dagaalka, saasuuna idiinku taamyeeli Alle nicmadiisa inaad islaam noqotaan (xaqa raacdaan).

فَإِن تَوَلَّوْا۟ فَإِنَّمَا عَلَيْكَ ٱلْبَلَٰغُ ٱلْمُبِينُ ﴿٨٢﴾

82. Hadday jeedsadaan waxaa uun korkaaga ah gaadhsiin cad.

يَعْرِفُونَ نِعْمَتَ ٱللَّهِ ثُمَّ يُنكِرُونَهَا وَأَكْثَرُهُمُ ٱلْكَٰفِرُونَ ﴿٨٣﴾

83. Way garan nicmada Alle wayna dafiri, badankooduna waa gaalo.

Alle wuxuu aayadahan ku sheegi nicmooyinkiisa qaarkood, sida guryaha, harkaha xoolaha, dhogorta xoolaha, geedaha la hadhsado, buuraha la dugsado, dharka kulaylka iyo qabowga ka dhawra, labiska dagaalka, waxaasoo dhanna wuxuu Alle u siiyey inay muslim ahaadaan, oo xaqa ku toosnaadaan, ciddiise ka gaalowda oo xaqa ka jeedsata iyada umbaa iska dhuntay ee Rasuulka waxaa uun laga rabaa xaq gaadhsiin, haddana iyagoo og nicmada Alle yey dafirayaan oo diidi. Tafsiirka Ibnu abii Xaatim waxaa lagu wariyey in nin reer miyiga carbeeda Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) u yimid warsadayna Nabiga markaas ku akhriyey aayaadkan isagoo leh haa mid walba, markaas jeedsaday. Markaasay soo degtay aayadda kale, waase aayad guud ahaan loola jeedo, ayna waajib tahay in nicmada Alle la aqoonsado laguna mahdiyo. **[An-Naxl: 80-83].**

وَيَوْمَ نَبْعَثُ مِن كُلِّ أُمَّةٍ شَهِيدًا ثُمَّ لَا يُؤْذَنُ لِلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَلَا هُمْ يُسْتَعْتَبُونَ ﴿٨٤﴾

84. (Xusuusi) maalintaan ka soo bixin ummad kasta marag, markaasna aan loo idmayn kuwii gaaloobay cudar daarasho, lagana doonayn cudur daar.

وَإِذَا رَءَا ٱلَّذِينَ ظَلَمُوا۟ ٱلْعَذَابَ فَلَا يُخَفَّفُ عَنْهُمْ وَلَا هُمْ يُنظَرُونَ ﴿٨٥﴾

85. Markay arkaan kuwii dulmi falay cadaabka, lagama fududeeyo xaggooda lamana sugo.

وَإِذَا رَءَا ٱلَّذِينَ أَشْرَكُوا۟ شُرَكَآءَهُمْ قَالُوا۟ رَبَّنَا هَٰٓؤُلَآءِ شُرَكَآؤُنَا ٱلَّذِينَ كُنَّا نَدْعُوا۟ مِن دُونِكَ ۖ فَأَلْقَوْا۟ إِلَيْهِمُ ٱلْقَوْلَ إِنَّكُمْ لَكَٰذِبُونَ ﴿٨٦﴾

86. Markay arkaan kuwii gaaloobay shurakadooda waxay dhahaan Allow kuwaasu waa shurakadannadii aannu caabudi jirray Alle ka sokow, markaasay ku soo tuureen hadal ah idinku been baad sheegaysaan.

وَأَلْقَوْا۟ إِلَى ٱللَّهِ يَوْمَئِذٍ ٱلسَّلَمَ ۖ وَضَلَّ عَنْهُم مَّا كَانُوا۟ يَفْتَرُونَ ﴿٨٧﴾

87. Waxayna u dhiibaan Alle maalintaa hoggaansiga, waxaana ka dhuma waxay been abuuran jireen.

ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَصَدُّوا۟ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ زِدْنَٰهُمْ عَذَابًا فَوْقَ ٱلْعَذَابِ بِمَا كَانُوا۟ يُفْسِدُونَ ﴿٨٨﴾

88. Kuwii gaaloobay ee ka awday dadka jidka Alle waxaan ugu siyaadinnaa cadaab korka cadaabka, faasuqnimadooda darteed.

Aayadahanna waxay ka warrami xaalka gaalada maalinta qiyaame iyo Nabigii ummad walba marag looga dhigi, wax cudur daarana aan laga aqbalaynin lana warsanayn, cadaabkana laga fududaynayn, oyna gaaladii iyo waxay caabudayeen oo Alle ka soo hadhay murmi isna beenin, gaalana maalintaa hoggaan Alle u dhiibi, mase aha waqti hoggaan dhiibid ee waa uun ama janno wanaag ku dhan yahay (Alle Ayaan ka baryaynaaye) ama naar dulli ku dhan yahay (Alle Ayaan ka magan galaynaaye) wixii la caabudaayay ee Alle ka soo hadhayna wuxuu noqday been la dhoobdhoobay iyo wax kama jiraan kuwii gaaloobay ee dadkana xaqa ka leexiyay waxay mudan cadaab mid kale lagu kordhiyo, faasiqnimadooda darteed, saasayna dhabtu u muuqan oo loo kala bixi, loona kala miirmi. **[An-Naxl: 84-88].**

وَيَوْمَ نَبْعَثُ فِى كُلِّ أُمَّةٍ شَهِيدًا عَلَيْهِم مِّنْ أَنفُسِهِمْ ۖ وَجِئْنَا بِكَ شَهِيدًا عَلَىٰ هَٰٓؤُلَآءِ ۚ وَنَزَّلْنَا عَلَيْكَ ٱلْكِتَٰبَ تِبْيَٰنًا لِّكُلِّ شَىْءٍ وَهُدًى وَرَحْمَةً وَبُشْرَىٰ لِلْمُسْلِمِينَ ﴿٨٩﴾

89. (Xusuusi) maalintaan ka soo bixinayno ummad kasta marag naftooda ah oon ku keenayno (Nabiyow) adoo marag ku ah kuwan (ummaddaada), waxaanna kugu dajinnay kitaab oo ah caddaynta wax kasta iyo hanuun iyo naxariis iyo bishaarada dadka muslimiinta ah.

90. Alle wuxuu fari caddaalad iyo samafal iyo wax siinta qaraabada wuxuuna reebi xumaan iyo munkar iyo gardarro, wuuna idin waanin inaad wax xasuusataan.

* إِنَّ ٱللَّهَ يَأۡمُرُ بِٱلۡعَدۡلِ وَٱلۡإِحۡسَٰنِ وَإِيتَآيِٕ ذِي ٱلۡقُرۡبَىٰ وَيَنۡهَىٰ عَنِ ٱلۡفَحۡشَآءِ وَٱلۡمُنكَرِ وَٱلۡبَغۡيِۚ يَعِظُكُمۡ لَعَلَّكُمۡ تَذَكَّرُونَ ٩٠

91. Oofiya ballanka Alle markaad ballantantaan hana burinina dhaarta ka dib intaad adkayseen ood uga yeesheen Alle korkiinna kafiil (ilaaliye), Alle na waa og yahay waxaad falaysaan.

وَأَوۡفُواْ بِعَهۡدِ ٱللَّهِ إِذَا عَٰهَدتُّمۡ وَلَا تَنقُضُواْ ٱلۡأَيۡمَٰنَ بَعۡدَ تَوۡكِيدِهَا وَقَدۡ جَعَلۡتُمُ ٱللَّهَ عَلَيۡكُمۡ كَفِيلًاۚ إِنَّ ٱللَّهَ يَعۡلَمُ مَا تَفۡعَلُونَ ٩١

92. Hana noqonnina sidii tii burisay (furfurtay) soohiddii xoog ka dib furfurid idinkoo ka yeelan dhaartiinna dhagar dhexdiinna ah, inay ahaatay ummad mid ka badan ummad kale, Alle wuu idinku imtixaani (amarkaas) iyo inuu idiin caddeeyo maalinta qiyaame waxaad isku diidanaydeen.

وَلَا تَكُونُواْ كَٱلَّتِي نَقَضَتۡ غَزۡلَهَا مِنۢ بَعۡدِ قُوَّةٍ أَنكَٰثًا تَتَّخِذُونَ أَيۡمَٰنَكُمۡ دَخَلَۢا بَيۡنَكُمۡ أَن تَكُونَ أُمَّةٌ هِيَ أَرۡبَىٰ مِنۡ أُمَّةٍۚ إِنَّمَا يَبۡلُوكُمُ ٱللَّهُ بِهِۦۚ وَلَيُبَيِّنَنَّ لَكُمۡ يَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِ مَا كُنتُمۡ فِيهِ تَخۡتَلِفُونَ ٩٢

Maalinta qiyaame cid walba marag baa loo keeni, ummaddanna waxaa marag u noqon Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee), quraan wax kasta cadeeyayna waa lagu soo dajiyay oo hanuun, naxariis iyo bishaaro u ah muslimiinta. Ibnu Mascuud wuxuu yidhi: quraanka waxaa naloogu caddeeyay cilmiga wax kasta. Aayadda kale Alle wuxuu ku faray caddaalad, sama fal, qaraabadoo la xidhiidhiyo, wuxuuna ku reebay xumaanta, munkarka iyo gardarrada, waa uu idin waanin si loo xusuusto wax.

Xadiith waxaa ku sugnaaday: dambi in Alle ugu soo dedejiyo ciqaabta adduunka iyadoo tii aakhiro dhimman tahay ka mudan gardarro iyo qaraabo goys ma jiro. Ibnu Mascuudna wuxuu yidhi: aayadda u kulmin badan ee quraanka waa tan. Alle na wuxuu jecel yahay umuuraha sare ee sharafta leh, wuxuuna nacaa waxyaalaha hoose ee xun sida xadiith ku sugnaatay, ballanka iyo dhaartana waa in la oofiyaa inta la adkeeyey ka dib, lana burinin oon la noqonin sidii haweeneydii soohday xadhigga iyo dunta markaas furfurtay, lagana yeelannin dhaarta dhagar isagoo laga faa'iidaysan in ummaddii ka

badatay umad kale Alle na dadka wuu imtixaani inuu u caddeeyo qiyaamada waxay isku khilaafsanaayeen kalana xukumo. **[An-Naxl: 89-92].**

وَلَوْ شَآءَ ٱللَّهُ لَجَعَلَكُمْ أُمَّةً وَٰحِدَةً وَلَٰكِن يُضِلُّ مَن يَشَآءُ وَيَهْدِى مَن يَشَآءُ ۚ وَلَتُسْـَٔلُنَّ عَمَّا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٩٣﴾

93. Hadduu doono Alle wuxuu idinka yeeli lahaa ummad kaliya wuxuuse dhumiyaa cidduu doono, wuuna hanuuniyaa cidduu doono, waana laydin warsan waxaad camal falayseen.

وَلَا تَتَّخِذُوٓاْ أَيْمَٰنَكُمْ دَخَلًۢا بَيْنَكُمْ فَتَزِلَّ قَدَمٌۢ بَعْدَ ثُبُوتِهَا وَتَذُوقُواْ ٱلسُّوٓءَ بِمَا صَدَدتُّمْ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ وَلَكُمْ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿٩٤﴾

94. Haka yeelannina dhaartiinna dhagar dhexdiinna ah oo ay markaas simbiriirixataa gomadi intay sugnayd ka dib ood dhadhamisaan xumaan (cadaab) ka jeedintiinna dadka jidka Alle darteed, waxaana idiin sugnaaday cadaab wayn.

وَلَا تَشْتَرُواْ بِعَهْدِ ٱللَّهِ ثَمَنًا قَلِيلًا ۚ إِنَّمَا عِندَ ٱللَّهِ هُوَ خَيْرٌ لَّكُمْ إِن كُنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿٩٥﴾

95. Hana ku gadannina ballanka Alle qiimo yar (waxba), waxa Alle agtiisa ah yaa idiin khayr roone haddaad wax ogtihiin.

مَا عِندَكُمْ يَنفَدُ ۖ وَمَا عِندَ ٱللَّهِ بَاقٍ ۗ وَلَنَجْزِيَنَّ ٱلَّذِينَ صَبَرُوٓاْ أَجْرَهُم بِأَحْسَنِ مَا كَانُواْ يَعْمَلُونَ ﴿٩٦﴾

96. Waxa agtiinna ah wuu dhammaan waxa Alle agtiisa ahna wuu hadhi, waxaanna ku abaal marinaynaa kuwa samra (adkaysta) ajirkooda midka ugu fiican ee ay falayeen.

Alle wuxuu aayadahan ku sheegi in hadduu doono uu dadka wada marin lahaa waddo qudha kana yeeli lahaa ummad kaliya, waxayse keentay xigmadiisu inay cidna dhunto midna hanuunto camalkoodana uu warsado qiyaamada, tan kale wuxuu ka reebi inay xaqa ka leexdaan oo simbiriirixdaan, dhaartana isku khayaamaan, markaa ay dhadhamiyaan ciqaab ka leexashada iyo kaleexinta jidka Alle, cadaab waynna u sugnaado, iyo inaan lagu gadannin ballanka Alle qiimo yar, waxa addunka jooga oo dhanna waa yar yahaye, waxaana khayr roon waxa Alle agtiisa ah hadday wax garan, waxa dadka agtiisa ahna way dhammaan oy tegi, waxaase hadhi oo waari waxa Alle agtiisa ah oo camal

fiican, ajir iyo khayra, waxaana lagu abaal marin kuwa dar Alle u samra ajirkooda ugu fiican camalkoodii dartiis.

Aayaduhuna waxay ku tusin in ballanka la dhawro, in hanuunka lagu dadaalo, inaan dhaarta dadka lagu khayaamin, inaan xaqa dadka laga celinnin lagana leexin, in dadka iyo waxay haystaan tagi, Alle iyo xaquna hadhi. **[An-Naxl: 93-96].**

مَنْ عَمِلَ صَٰلِحًا مِّن ذَكَرٍ أَوْ أُنثَىٰ وَهُوَ مُؤْمِنٌ فَلَنُحْيِيَنَّهُۥ حَيَوٰةً طَيِّبَةً ۖ وَلَنَجْزِيَنَّهُمْ أَجْرَهُم بِأَحْسَنِ مَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿٩٧﴾

97. Ciddii camal fasha wanaag oo raga ama haweena isagoo mu'mina waxaan noolaynaynaa nolol wanaagsan, waxaanna ku abaal marinaynaa ajirkooda waxa ugu wanaagsan ee ay falayeen.

فَإِذَا قَرَأْتَ ٱلْقُرْءَانَ فَٱسْتَعِذْ بِٱللَّهِ مِنَ ٱلشَّيْطَٰنِ ٱلرَّجِيمِ ﴿٩٨﴾

98. Markaad akhriyi quraanka ka magan gal Alle shaydaan la dheereeyey.

إِنَّهُۥ لَيْسَ لَهُۥ سُلْطَٰنٌ عَلَى ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَلَىٰ رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ ﴿٩٩﴾

99. Isagu kuma leh xujo kuwa rumeeyey xaqa Rabbigoodna talo saarto.

إِنَّمَا سُلْطَٰنُهُۥ عَلَى ٱلَّذِينَ يَتَوَلَّوْنَهُۥ وَٱلَّذِينَ هُم بِهِۦ مُشْرِكُونَ ﴿١٠٠﴾

100. Wuxuuse xujo ku yeeshaa kuwa ka wali yeesha iyo kuwa la wadaajiya Alle.

وَإِذَا بَدَّلْنَآ ءَايَةً مَّكَانَ ءَايَةٍ وَٱللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا يُنَزِّلُ قَالُوٓا۟ إِنَّمَآ أَنتَ مُفْتَرٍۭ ۚ بَلْ أَكْثَرُهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٠١﴾

101. Haddaan ku baddalno aayad meel aayad kale Alle na og yahay wuxuu dejin waxay dhahaan waxaad uun tahay beenabuurte, badankooduse wax ma oga.

قُلْ نَزَّلَهُۥ رُوحُ ٱلْقُدُسِ مِن رَّبِّكَ بِٱلْحَقِّ لِيُثَبِّتَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَهُدًى وَبُشْرَىٰ لِلْمُسْلِمِينَ ﴿١٠٢﴾

102. Waxaad dhahdaa waxaa ka soo dejiyey ruuxii daahirka ahaa (jibriil) xagga Allehaa si xaq ah inuu ku sugo kuwii rumeeyey xaqa, iyo hanuun iyo bishaaro isagoo u ah muslimiinta.

Rag iyo haween ciddii wanaag fasha waxaa lagu abaal marin wanaag illeen waa loo siman yahay cibaadada Alle iyo khayrkiisa iyo wanaaggiisee, wuxuuna Alle ku noolayn nolol wanaagsan, waxaana xadiith ku sugnaa:

waxaa liibaanay ruuxii muslim noqda oo lagu arsuqo kafaaf oo ku raali noqda waxa Alle ku arsuqo, waxaa wariyay imaam Muslim. Marka quraanka la akhrinna waa in Alle shaydaanka laga magan galo, awoodna kuma leh mu'mininta Allahood tala saarta ee wuxuu awood iyo suldho ku leeyahay kuwa ka wali yeesha ee raaca dhumintiisa iyo xumaantiisa iyo kuwa Alle la wadaajiya cibaadada, marka Alle aayad mid kale ku baddalana waxay dhahaan gaaladu waa been abuurasho, Alle ayaase og wuxuu soo dejin, xaqna ku soo dejiyay, jibriilla u soo dhiibay, waase jaahiliin badankoodu, wuxuuna u soo dejiyay inuu ku sugo kuwa xaqa rumeeyay, hanuun iyo bishaarana u noqdo muslimiinta, halkaasna waxaa ka muuqda in ruuxii mu'mina oo toosnaada rag iyo haweenba Alle ku noolayn nolol fiican, aakhirana khayr siin, inuu shaydaan col yahay lagana magan galo Alle mar walba iyo marka quraanka la akhrin inuusan awood ku lahayn shaydaanku mu'mininta Alle tala saarta, ee uu awood iyo suldo ku leeyahay kuwa talo u dhiibta ee ugu shariig yeela Alle, in Alle awoodda isagu iska leeyahay soo dajinna jiray wuxuu doono oo quraanka ah. **[An-Naxl: 97-102].**

وَلَقَدْ نَعْلَمُ أَنَّهُمْ يَقُولُونَ إِنَّمَا يُعَلِّمُهُۥ بَشَرٌ ۗ لِّسَانُ ٱلَّذِى يُلْحِدُونَ إِلَيْهِ أَعْجَمِىٌّ وَهَٰذَا لِسَانٌ عَرَبِىٌّ مُّبِينٌ ﴿١٠٣﴾

103. Waxaan dhab u ognahay inay dhihi waxaa bara Nabiga quraanka dad, carrabka ka ay ku leexin waa cajami kanna waa lisaan (af carabi) cad.

إِنَّ ٱلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِـَٔايَـٰتِ ٱللَّهِ لَا يَهْدِيهِمُ ٱللَّهُ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١٠٤﴾

104. Kuwaan rumayn aayaadka Alle ma hanuuniyo Alle waxayna mudan cadaab daran.

إِنَّمَا يَفْتَرِى ٱلْكَذِبَ ٱلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِـَٔايَـٰتِ ٱللَّهِ ۖ وَأُو۟لَـٰٓئِكَ هُمُ ٱلْكَـٰذِبُونَ ﴿١٠٥﴾

105. Waxaa uun abuurta been kuwaan rumayn aayaadka Alle kuwaasuna iyaga umbaa beenaalayaala.

مَن كَفَرَ بِٱللَّهِ مِنۢ بَعْدِ إِيمَـٰنِهِۦٓ إِلَّا مَنْ أُكْرِهَ وَقَلْبُهُۥ مُطْمَئِنٌّۢ بِٱلْإِيمَـٰنِ وَلَـٰكِن مَّن شَرَحَ بِٱلْكُفْرِ صَدْرًا فَعَلَيْهِمْ غَضَبٌ مِّنَ ٱللَّهِ وَلَهُمْ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿١٠٦﴾

106. Kuwa Alle ka gaaloobay rumayn ka dib (ee mudan halaag) ruux lagu qasbay qalbigiisuna ku xasillan yahay iimaanka mooyee, ruuxiise laabtiisu u waasac noqoto (rumayso) gaalnimo waxaa korkooda ah cadho Alle, waxayna mudan cadaab wayn.

ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمُ ٱسْتَحَبُّواْ ٱلْحَيَوٰةَ ٱلدُّنْيَا عَلَى ٱلْءَاخِرَةِ وَأَنَّ ٱللَّهَ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿١٠٧﴾

107. Arrintaasuna waa inay ka doorteen nolosha dhaw (ee adduun) aakhiro iyo inaan Alle hanuuninayn kuwa gaalada ah.

أُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ طَبَعَ ٱللَّهُ عَلَىٰ قُلُوبِهِمْ وَسَمْعِهِمْ وَأَبْصَٰرِهِمْ ۖ وَأُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْغَٰفِلُونَ ﴿١٠٨﴾

108. Kuwaas Alle ayaa daboolay quluubtooda, maqalkooda iyo araggooda waana kuwa uun halmaansan (xaqa).

لَا جَرَمَ أَنَّهُمْ فِى ٱلْءَاخِرَةِ هُمُ ٱلْخَٰسِرُونَ ﴿١٠٩﴾

109. Waxaa sugan in kuwaasu aakharo ay iyagu uun khasaareen.

Gaaladu wax kasta oo ceeba oo u muuqata way ku sheegeen Nabiga iyo quraankaba, intay ka dhahaan waxaa wax bara nin cajami ah, Alle ayaase beeniyay tirtirayna beentoodii, illeen quraanku waa carabi cade, cid dhuntay oon rumaynayn xaqana Alle ma waafajiyo hanuun iyo xaqa, waxayn mudan ciqaab daran, beenna waxaa abuurta kuwaan rumaynin aayaadka Alle ee uun beenaalayaasha ah, ee ah kuwa gaalooba rumayn ka dib cid lagu qasbo oo qalbigeedu xaqa ku sugan yahay mooyee, ciddiise qalbigeedu aqbalo gaalnimada waxaa korkooda ah cadho Alle, waxayna mudan cadaab wayn, illeen adduun bay aakhiro ka doorteene, Alle na ma hanuuniyo, waana kuwa Alle daboolay qalbigooda, maqalkooda iyo araggooda ee halmaamay xaqa, dhab ahaanna u khasaaray, waana in Alle laga baryo ku sugnaanta diinta, laguna dadaalo ku sugnaanteeda, ciddii dooni inay aragto siday muslimiintii hore ugu sugnaayeen diintooda ha akhirdo taariikhda Bilaal, Khubayb binu Cadiyi, Xabiib binu Zayd, Cabdullaahi binu Xudaafa iyo kuwo kale wuxuu arki geesinnimada iyo adkaysiga iyo xaq ku sugnaanta. **[An-Naxl: 103-109].**

ثُمَّ إِنَّ رَبَّكَ لِلَّذِينَ هَاجَرُواْ مِنۢ بَعْدِ مَا فُتِنُواْ ثُمَّ جَٰهَدُواْ وَصَبَرُوٓاْ إِنَّ رَبَّكَ مِنۢ بَعْدِهَا لَغَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١١٠﴾

110. Rabbigaase kuwa hijrooday intii la fidmeeyey (la dhibay) ka dib markaas jahaaday oo samray (adkaystay) Rabbigaa intaas ka dib waa u dambi dhaafe naxariista.

يَوْمَ تَأْتِى كُلُّ نَفْسٍ تُجَٰدِلُ عَن نَّفْسِهَا وَتُوَفَّىٰ كُلُّ نَفْسٍ مَّا عَمِلَتْ وَهُمْ لَا يُظْلَمُونَ ﴿١١١﴾

111. Waana maalin ay imaan naf walba iyadoo ka doodi (daafici) nafteeda oo loo oofin naf kasta waxay fashay lana dulminayn.

وَضَرَبَ ٱللَّهُ مَثَلًا قَرْيَةً كَانَتْ ءَامِنَةً مُّطْمَئِنَّةً يَأْتِيهَا رِزْقُهَا رَغَدًا مِّن كُلِّ مَكَانٍ فَكَفَرَتْ بِأَنْعُمِ ٱللَّهِ فَأَذَٰقَهَا ٱللَّهُ لِبَاسَ ٱلْجُوعِ وَٱلْخَوْفِ بِمَا كَانُوا۟ يَصْنَعُونَ ﴿١١٢﴾

112. Alle wuxuu tusaale ka yeelay magaalo ahayd aammin oo xasilloon ugana yimaaddo risqigeedu (cunnada) oo barwaaqo ah meel kasta oo ka gaalowday nicmooyinkii Alle oo Alle dhadhansiiyey gaajo dabooshay iyo cabsi waxay sameynayeen darteed.

وَلَقَدْ جَآءَهُمْ رَسُولٌ مِّنْهُمْ فَكَذَّبُوهُ فَأَخَذَهُمُ ٱلْعَذَابُ وَهُمْ ظَٰلِمُونَ ﴿١١٣﴾

113. Waxaa dhab ahaan ugu yimid rasuul ka mida wayna beeniyeen, waxaana qabtay cadaab iyagoo daalimiina.

Ciddii ay u suuroobi waydo inay dar Alle u hijrooto, ka dibse hijroota intii la dhibay markaas jahaadda oo adkaysata Alle wuu u dambi dhaafi una naxariisan, maalinta qiyaamana waa maalin naf kasta ay ka doodi oy ka murmi, nafteeda naf kastana loo oofin waxay camal fashay, oon lana dulmiyeyn, waxaana tusaale ugu filan magaalo aammin iyo nabad ahayd cunnaduna uga imaan jirtay meel kasta oo ka gaalowday nicmooyinkii Alle oo Alle dhadhansiiyey gaajo iyo cabsi camalkoodii dartiis, waxaana u yimid rasuul ka mida ooy beeniyeen markaas cadaab qabtay iyagoo daalimiina.

Ibnu Kathiir wuxuu yidhi: taasi waa tusaale, Maka waxay ahayd aammin xasilloon ciddii gashana aammin noqon, markaasay gaalowday oo diidday nicmooyinkii Alle una wayneyd soo bixintii Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wayna caasiyeen Rasuulkii wayna khilaafeen intuu abaar ku habaaro oo markaas abaari ku dhacday waana abaalka xaq diide oo dhan. **[An-Naxl: 110-113].**

فَكُلُوا۟ مِمَّا رَزَقَكُمُ ٱللَّهُ حَلَٰلًا طَيِّبًا وَٱشْكُرُوا۟ نِعْمَتَ ٱللَّهِ إِن كُنتُمْ إِيَّاهُ تَعْبُدُونَ ﴿١١٤﴾

114. Ee cuna waxa Alle idinku arsuqay ee xalaasha fiicana kuna shukriya nicmada Alle haddaad isaga caabudaysaan.

إِنَّمَا حَرَّمَ عَلَيْكُمُ ٱلْمَيْتَةَ وَٱلدَّمَ وَلَحْمَ ٱلْخِنزِيرِ وَمَآ أُهِلَّ لِغَيْرِ ٱللَّهِ بِهِۦ ۖ فَمَنِ ٱضْطُرَّ غَيْرَ بَاغٍ وَلَا عَادٍ فَإِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١١٥﴾

115. Wuxuu uun idinka xarrimay bakhtiga, dhiigga, hilibka doofaarka iyo wixii lagu gawraco waxaan magaca Alle ahayn, ciddii dhibaatoota

(gaajo darteed, sidaana ku cunta) iyadoon dulmiyin xadna gudbin Alle waa dambi dhaafe naxariista.

وَلَا تَقُولُواْ لِمَا تَصِفُ أَلۡسِنَتُكُمُ ٱلۡكَذِبَ هَٰذَا حَلَٰلٞ وَهَٰذَا حَرَامٞ لِّتَفۡتَرُواْ عَلَى ٱللَّهِ ٱلۡكَذِبَۚ إِنَّ ٱلَّذِينَ يَفۡتَرُونَ عَلَى ٱللَّهِ ٱلۡكَذِبَ لَا يُفۡلِحُونَ ١١٦

116. Ha dhihina wuxuu carrabkiinna ku tilmaami been kani waa xalaal kanna waa xaaraan, inaad ku been abuurataan Alle, kuwa ku been abuurta Alle ma liibaanaan.

مَتَٰعٞ قَلِيلٞ وَلَهُمۡ عَذَابٌ أَلِيمٞ ١١٧

117. Waa nolol yar (adduunku) waxayna mudan cadaab daran.

وَعَلَى ٱلَّذِينَ هَادُواْ حَرَّمۡنَا مَا قَصَصۡنَا عَلَيۡكَ مِن قَبۡلُۖ وَمَا ظَلَمۡنَٰهُمۡ وَلَٰكِن كَانُوٓاْ أَنفُسَهُمۡ يَظۡلِمُونَ ١١٨

118. Kuwii yuhuudoobay waxaan ka xarrimnay waxaan kaaga qisoonnay horay, mana aannaan dulmiyin iyagaase naftooda dulmiyey.

ثُمَّ إِنَّ رَبَّكَ لِلَّذِينَ عَمِلُواْ ٱلسُّوٓءَ بِجَهَٰلَةٖ ثُمَّ تَابُواْ مِنۢ بَعۡدِ ذَٰلِكَ وَأَصۡلَحُوٓاْ إِنَّ رَبَّكَ مِنۢ بَعۡدِهَا لَغَفُورٞ رَّحِيمٞ ١١٩

119. Markaas Allehaa kuwa xumaan ku fala jaahilnimo (oo aan ku baraarugsaneyn carada Alle ee ka dhalanaysa, yaqiintuna ku liidato) markaas toobadkeena intaas ka dib oo suubbiya camalka, Allehaa intaa ka dib wuu u dhaafi una naxariisan.

Xalaasha waa in la cuno xaaraantana laga fogaado sida bakhtiga, dhiigga, hilibka doofaarka, waxa lagu xuso waxaan magaca Alle ahayn, boolida iyo waxaan ku bannaanayn sharciga islaamka iyo diinta, ruuxiise ka yaaba khatar gaajo darteed wuu ka cunaa waxaan la gawricin isagoon xad gudbayn dulmina falayn, waana in laga dheeraado inuu been iyo cilmi darro la yidhaah kani waa xalaal kanna waa xaaraan isagoo been sheegi, ciddii Alle ku been abuuratana ma liibaanayso, adduunkana wuxuu ku noolaan wax yar, markaas cadaab daran mudan; yuhuudna waxaa laga xarrimay wixii horay loo soo sheegay Alle na ma dulmiyin ee iyagaa isdulmiyey, ciddiise jaahilnimo dambi ku samaysa markaas toobad keenta oo suubbida, Alle wuu u dambi dhaafi una naxariisan. Culimadii hore qaarkood waxay dheheen: ciddii Alle caasida waa jaahil, saas darteed waa in xalaal la cuno, xaqa lagu hadlo, la toobad keeno. **[An-Naxl: 114-119].**

120. (Nabi) Ibraahim wuxuu ahaa ummad «khayr fare, lagu daydo» Alle adeece xaqa u iishe, mana ka mid ahayn mushrikiinta.

إِنَّ إِبْرَٰهِيمَ كَانَ أُمَّةً قَانِتًا لِّلَّهِ حَنِيفًا وَلَمْ يَكُ مِنَ ٱلْمُشْرِكِينَ ﴿١٢٠﴾

121. Kuna shukriya nicmada Alle, wuuna doortay wuxuuna ku hanuuniyey jidka toosan.

شَاكِرًا لِّأَنْعُمِهِ ۚ ٱجْتَبَىٰهُ وَهَدَىٰهُ إِلَىٰ صِرَٰطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿١٢١﴾

122. Waxaanna siinnay adduunka wanaag, aakhirana wuxuu ka mid noqon kuwa suubban.

وَءَاتَيْنَٰهُ فِى ٱلدُّنْيَا حَسَنَةً ۖ وَإِنَّهُۥ فِى ٱلْءَاخِرَةِ لَمِنَ ٱلصَّٰلِحِينَ ﴿١٢٢﴾

123. Markaas waxaan kuu waxyoonnay Nabiyow: raac diinta (Nabi) Ibraahim ee toosan kama mid ahayn mushriikiinta.

ثُمَّ أَوْحَيْنَآ إِلَيْكَ أَنِ ٱتَّبِعْ مِلَّةَ إِبْرَٰهِيمَ حَنِيفًا ۖ وَمَا كَانَ مِنَ ٱلْمُشْرِكِينَ ﴿١٢٣﴾

124. Sabtida (weyneyntiisa) waxaa uun lagu faral yeelay kuwii isku khilaafay, Rabbigaana wuu kala xukumi dhexdooda maalinta qiyaame waxay isku khilaafayeen.

إِنَّمَا جُعِلَ ٱلسَّبْتُ عَلَى ٱلَّذِينَ ٱخْتَلَفُوا۟ فِيهِ ۚ وَإِنَّ رَبَّكَ لَيَحْكُمُ بَيْنَهُمْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ فِيمَا كَانُوا۟ فِيهِ يَخْتَلِفُونَ ﴿١٢٤﴾

125. Ugu yeedh jidka Allehaa si xigmada iyo wacdi fiicana, kulana dood sida u fiican, Rabbigaana wuu og yahay cidda ka dhunta jidkiisa wuuna og yahay kuwa hanuunsan.

ٱدْعُ إِلَىٰ سَبِيلِ رَبِّكَ بِٱلْحِكْمَةِ وَٱلْمَوْعِظَةِ ٱلْحَسَنَةِ ۖ وَجَٰدِلْهُم بِٱلَّتِى هِىَ أَحْسَنُ ۚ إِنَّ رَبَّكَ هُوَ أَعْلَمُ بِمَن ضَلَّ عَن سَبِيلِهِۦ وَهُوَ أَعْلَمُ بِٱلْمُهْتَدِينَ ﴿١٢٥﴾

126. Haddaad wax ciqaabaysaan u ciqaaba inta laydin ciqaabay oo kale, haddaad samirtaanna isagaa u khayr roon kuwa samra.

وَإِنْ عَاقَبْتُمْ فَعَاقِبُوا۟ بِمِثْلِ مَا عُوقِبْتُم بِهِۦ ۖ وَلَئِن صَبَرْتُمْ لَهُوَ خَيْرٌ لِّلصَّٰبِرِينَ ﴿١٢٦﴾

127. Samir, ku mana aha samirkaagu kaalmada Alle iyo (waafajintiiee) mooyee, hana ka murugoon, hana ka cidhiidhyamin waxay dhagri.

وَٱصْبِرْ وَمَا صَبْرُكَ إِلَّا بِٱللَّهِ ۚ وَلَا تَحْزَنْ عَلَيْهِمْ وَلَا تَكُ فِى ضَيْقٍ مِّمَّا يَمْكُرُونَ ﴿١٢٧﴾

128. Alle na wuxuu la jiraa kuwa dhawrsada wuxuuna la jiraa kuwa samo fala.

إِنَّ ٱللَّهَ مَعَ ٱلَّذِينَ ٱتَّقَواْ وَّٱلَّذِينَ هُم مُّحْسِنُونَ ﴿١٢٨﴾

Nabi Ibraahim wuxuu ahaa umad iyo imaam khayrka lagaga daydo, oo Alle adeeca xaqana ku toosan mushrikiinta na ka fog, nicmada Alle na ku mahdiya, Alle ayaana doortay, hanuuniyeyna, siiyeyna adduunka wanaag, aakharana ka yeelay kuwa suubban, markaas Nabiga faray inuu raaco diintii Nabi Ibraahim ee toosnaa, saas darteed waa inaan xaqa ku noqonnaa imaam lagu daydo oo khayrka u hoggaamiya, tan kale wuxuu Alle ka warramay sida yuhuud loogu yeelay sabtida inay cibaadaystaan nastaanna, sida ummaddeenna loogu yeelay jimcada, wayse iskhilaafeen yuhuud, Alle ayaase kala xukumi qiyaamada waxay isku khilaafeen, waana in dadka xaqa loogu yeedho lana tusiyo si xigmad iyo kaadsiinyo iyo waano fiicana, ahaynna adayg iyo canaan iyo darraan, waana in sida u fiican loogula doodo xaqa ciddii xaqa ku doodi, Alle na waa og yahay cidda dhumi iyo tan hanuuni, haddii la ciqaabi oo laga aarsan cid kugu xad gudubtana waa in uun la ciqaabo wax la'eg waxay ciqaabeen haddii lays ka samraanna u fiican ciddiii samirta, dar Alle ayaana loo samraa, sidii Nabiga kana reebay Alle inuu ka murugoodo ciddii beenisa oo khilaafta kana cidhiidhyamin dhagartooda, Alle na wuxuu la jiraa kuwa dhawrsada iyo kuwa samo fala. Markii sayid Xamze lagu dilay uxud lagana jeexjeexay jidhkiisii yuu Nabigu yidhi: waxaan ugu aari toddobaatan. Markaasay soo degtay, sida la weriyay. **[An-Naxl: 120-128].**

Suurat Al-Israa'

سُورَةُ الْإِسْرَاءِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

سُبْحَٰنَ ٱلَّذِىٓ أَسْرَىٰ بِعَبْدِهِۦ لَيْلًا مِّنَ ٱلْمَسْجِدِ ٱلْحَرَامِ إِلَى ٱلْمَسْجِدِ ٱلْأَقْصَا ٱلَّذِى بَٰرَكْنَا حَوْلَهُۥ لِنُرِيَهُۥ مِنْ ءَايَٰتِنَآ ۚ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْبَصِيرُ ﴿١﴾

1. Waxaa nasahan (ceeb ka fog) Allaha ka guuraysiiyay addoonkiisa (Nabiga) (una dheelmiyay) habeen masaajidka xurmada leh (Maka una dheelmiyay) xagga Masjidkii Aqsa een barakaynay gaararkiisa inaan tusinno Nabiga aayaadkannaga, Alle na waa maqle arka.

وَءَاتَيْنَا مُوسَى ٱلْكِتَٰبَ وَجَعَلْنَٰهُ هُدًى لِّبَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ أَلَّا تَتَّخِذُوا۟ مِن دُونِى وَكِيلًا ﴿٢﴾

2. Waxaana siinnay Nabi Muuse kitaabkii (tawreed) waxaanna uga yeellay hanuun banii israa'iil inaydaan ka yeelannin wax iga soo hadhay wakiil.

ذُرِّيَّةَ مَنْ حَمَلْنَا مَعَ نُوحٍ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ عَبْدًا شَكُورًا ﴿٣﴾

3. Faricii kuwaan la xambaarnay Nabi Nuux, wuxuunwa ahaa addoon (Alle) ee shugri badan.

Alle isagaa adduun iyo aakhiro iyo waxa dhex joogaba abuuray, cid abuurka kula murmina ma jirto, suu doono yuuna ugu tasarrufaa una maamulaa, wuxuuna Nabigiisii Muxamed ahaa (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ka dheelmay kana guuriyey maka una guuriyey xagga Masaajidka Aqsa ee isna barakaysan, si Alle u tusiyo nicmooyinka Alle, illeen Alle ayaa wax walbana maqla arkanee, waxaana ku sugnaaday xaqnimada arrintaas xadiithyo badan waxaana ka mida xadiithka dheer ee Bukhaari wariyey ee ah: Anas binu Maalig wuxuu yidhi: habeen laga guuriyey Rasuulka masaajidka kacbada oy u yimaadeen saddex ruux, waana xadiith ka warramaya wuxuu arkay Nabigu habeenkaa.

Bayhaqina wuxuu wariyey in Nabigu uu arkay nuur, imaam Axmedna isna wuxuu weriyey xadiith ku saabsan xaalkan, waxayna sugi in Nabiga Maka laga dheelmay oo Qudsi loo dheelmay, in samada loo koriyey, inuu Nabiyadii la kulmay, in salaadda la soo faray, inuu arkay dad badan oo la ciqaabi, sida kuwa salaadda ka cuslaaday, khamrada caba, xaaraanta cuna, zinaysta, wax xanta, xaqa u hoggaansamin, iyo kuwo kale, wuxuuna arkay jannadii iyo naartii, Alle na wuu sharrifay Nabigiisa, sidaas daraadeed waa in si dhaba loo rumeeyo guurinta Nabiga iyo koridiisa cirka iyo waxyaalaha la faray iyo wuxuu arkay, waxaana shakin amma beenin munaafiq iyo gaalo, waa in lagu adkaado diinta Alle halkaas Nabiga u geeyey gaar ahaan salaadda, xumaantana laga fogaado, ciddii doonta inay warbadan ka ogaato arrintan ha akhrido tafsiirka aayadda, aayadaha kale waxay ka warrami inuu Alle Nabi Muuse siiyey kitaabkii tawreed, ee hanuuninaayey banii israa'iil ugana digaayey inayna wakiil ka dhiganayn wax Alle ka soo hadhay, illeen waa faricii cidduu Alle la koriyey Nabi Nuuxe, wuxuuna ahaa addoon mahadnaq badan, waana inay xusuustaan nicmadaas xaqana ku toosnaadaan, Alle na si dhaba u caabudaan una aqoonsadaan, haddii kale dulli iyo ciqaab. Ibnu Kathiir wuxuu yidhi: xadiithka dheelminta waxaa wariyey Anas, Cumar binu Khadhaab, Cali, Ibnu Mascuud, Abii Dar, Abii Hureere, Maalig binu Sacsacata, Abii Saciid, Ibnu Cabbaas, Shaddaad, Ubayi ibnu Camar, Jaabir, Abii Ayuub, Xudeefe, Abii Umaama, Samura, Suhayb, Umu Haani, Caa'isho, Asmo. **[Al-Israa': 1-3].**

وَقَضَيْنَآ إِلَىٰ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ فِى ٱلْكِتَٰبِ لَتُفْسِدُنَّ فِى ٱلْأَرْضِ مَرَّتَيْنِ وَلَتَعْلُنَّ عُلُوًّا كَبِيرًا ﴿٤﴾

4. Waxaan ku (ogaysiinnay) ugu waxyoonnay banii israa'iil kitaabka (tawreed) inaad fasaadinaysaan dhulka labo jeer, isna kibrinaysaan iskibrin wayn.

فَإِذَا جَآءَ وَعْدُ أُولَىٰهُمَا بَعَثْنَا عَلَيْكُمْ عِبَادًا لَّنَآ أُو۟لِى بَأْسٍ شَدِيدٍ فَجَاسُوا۟ خِلَٰلَ ٱلدِّيَارِ ۚ وَكَانَ وَعْدًا مَّفْعُولًا ﴿٥﴾

5. Markuu yimaaddo yabooha (waqtiga) midda hore waxaan idinku soo bixinnaa «dirraa» addoommadannada oo xoog daran leh, dhexgalina (hanan) guryaha dhexdooda waana yabooh la fali.

ثُمَّ رَدَدْنَا لَكُمُ ٱلْكَرَّةَ عَلَيْهِمْ وَأَمْدَدْنَٰكُم بِأَمْوَٰلٍ وَبَنِينَ وَجَعَلْنَٰكُمْ أَكْثَرَ نَفِيرًا ﴿٦﴾

6. Markaasaan idinku soo celinnaa dawladnimada, idinkuna xoogaynaa xoolo iyo carruur, idinkana yeellaa kuwa tiro badan.

إِنْ أَحْسَنتُمْ أَحْسَنتُمْ لِأَنفُسِكُمْ ۖ وَإِنْ أَسَأْتُمْ فَلَهَا ۚ فَإِذَا جَآءَ وَعْدُ ٱلْآخِرَةِ لِيَسُۥٓـُٔوا۟ وُجُوهَكُمْ وَلِيَدْخُلُوا۟ ٱلْمَسْجِدَ كَمَا دَخَلُوهُ أَوَّلَ مَرَّةٍ وَلِيُتَبِّرُوا۟ مَا عَلَوْا۟ تَتْبِيرًا ﴿٧﴾

7. Haddaad samo fashaan waxaad u samo fasheen naftiinna, haddaad xumaan fashaanna waa uun naftiinna, markuu yimaaddo yabooha dambana way xumeeyaan wajigiinna iyo inay galaan masaajidka (Baytul Maqdis) siday u galeen markii hore iyo inay dammiraan «tirtiraan» waxay u adkaadaan tirtirid.

عَسَىٰ رَبُّكُمْ أَن يَرْحَمَكُمْ ۚ وَإِنْ عُدتُّمْ عُدْنَا ۘ وَجَعَلْنَا جَهَنَّمَ لِلْكَٰفِرِينَ حَصِيرًا ﴿٨﴾

8. Waxay u dhawdahay in Allihiin idiin naxaariisto, haddaad ku noqotaanna waannu ku noqon, waxaana uga yeelnay jahannamo gaalada gogol.

Aayadahanna wuxuu Alle kaga warrami xaalka Banii Israa'iil iyo inay fasaadin dhulka labo jeer adna isula weynaan, isuna kibrin, markaas labada jeerba lagu diri addoommo Alle oo daran dhulkana ka dhex geli kana qabsan, ciqaab iyo halaagna dhadhansiin, hadday wanaag falaanna waa uun naftooda hadday xumaan falaanna waa dhibka naftooda, wuxuuna Alle sugay in marka dambe masjidka qudsi loogu gali xumaan iyo xanuunna ay la kulmi, naxariista Allese way u furan tahay ciddii Alle u noqon oo toobad keeni, haddayse xumaanta ku noqdaan Alle na wuxuu ku noqon ciqaabtooda iyo abaal marintooda, jahannamana waa gogosha gaalada, wax badan yey culimadu ka hadleen arrintaas laakiin Alle ayaa og inay tegtay iyo inay dhimman tahay. Maxaa diidi haddii lagu ciqaabo gacmaha muslimiinta Qudsina laga soo celiyo. **[Al-Israa': 4-8].**

إِنَّ هَٰذَا ٱلْقُرْءَانَ يَهْدِى لِلَّتِى هِىَ أَقْوَمُ وَيُبَشِّرُ ٱلْمُؤْمِنِينَ ٱلَّذِينَ يَعْمَلُونَ ٱلصَّٰلِحَٰتِ أَنَّ لَهُمْ أَجْرًا كَبِيرًا ﴿٩﴾

9. Quraankanna wuxuu ku hanuunin dadka arrinta u toosan uguna bishaarayn kuwa fala wanaag inay mudan ajir wayn.

وَأَنَّ ٱلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِٱلْآخِرَةِ أَعْتَدْنَا لَهُمْ عَذَابًا أَلِيمًا ﴿١٠﴾

10. Kuwaan rumeynin aakhirana waxaan u darabnay cadaab daran.

وَيَدْعُ ٱلْإِنسَٰنُ بِٱلشَّرِّ دُعَآءَهُۥ بِٱلْخَيْرِ ۖ وَكَانَ ٱلْإِنسَٰنُ عَجُولًا ﴿١١﴾

11. Wuxuu u yeedhaa (baryaa) dadku shar (habaaraana naftiisa iyo waxa uu jecel yahay) siduu ugu duceysto «oo u baryo in la siiyo» khayrka, dadkuna waa deg dege.

وَجَعَلْنَا ٱلَّيْلَ وَٱلنَّهَارَ ءَايَتَيْنِ ۖ فَمَحَوْنَآ ءَايَةَ ٱلَّيْلِ وَجَعَلْنَآ ءَايَةَ ٱلنَّهَارِ مُبْصِرَةً لِّتَبْتَغُوا۟ فَضْلًا مِّن رَّبِّكُمْ وَلِتَعْلَمُوا۟ عَدَدَ ٱلسِّنِينَ وَٱلْحِسَابَ ۚ وَكُلَّ شَىْءٍ فَصَّلْنَٰهُ تَفْصِيلًا ﴿١٢﴾

12. Waxaan ka yeellay habeenka iyo maalinta labo calaamo, waxaana tirraa calaamada habeenka, waxaanna ka yeellaa calaamada maalinta mid dhexdeeda wax lagu arko, inaad doontaan fadliga Allihiin iyo inaad ku ogaataan tirada sanooyinka iyo xisaabta, wax kastana waxaannu u caddeynay caddayn (aada).

وَكُلَّ إِنسَٰنٍ أَلْزَمْنَٰهُ طَٰٓئِرَهُۥ فِى عُنُقِهِۦ ۖ وَنُخْرِجُ لَهُۥ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ كِتَٰبًا يَلْقَىٰهُ مَنشُورًا ﴿١٣﴾

13. Ruux kasta waxaan laasiminnay camalkiisa (loo qaddaray) luquntiisa, waxaanna u soo bixinnaa maalinta qiyaame kitaab (camal kiisii ku qoran yahay oo) uu la kulmi isagoo fidsan.

ٱقْرَأْ كِتَٰبَكَ كَفَىٰ بِنَفْسِكَ ٱلْيَوْمَ عَلَيْكَ حَسِيبًا ﴿١٤﴾

14. Laguna dhihi akhri kitaabkaaga, naftaadaa kuugu filan maanta korkaaga xisaabe.

Quraankuna wuxuu ku toosin dadka arrinta ugu toosan uguna fiican xagga caqiidada, xukunka, akhlaaqda, macaamilada iyo wax kasta oo wanaag lagu gaadho adduun iyo aakhiraba, wuxuuna ugu bishaarayn mu'miniinta wanaagga fala ajir wayn, kuwaan Alle iyo aakhiro rumaynna cadaab daran in loo darbay, tan kale dadku wuu degdegaa isagoo shar iyo balaayo baryi sida khayrka iyo wanaagga, waxaana xadiitha: ha habaarina naftiinna iyo xoolihiinna, waxaa laga yaabaa inaad ka waafaqdaan Alle saacad la ajiibo oo laydin ajiibo, Alle na wuxuu ka yeelay habeenka iyo maalinta calaamad ku tusin qudradiisa, iyo inay xasilaan habeenkii, una socdaan maalintii shaqo iyo sanco iyo camal iyo safar, kuna ogaadaan ayaamaha, jumcooyinka, bilaha iyo sanooyinka, wuxuuna Alle caddeeyey wax kastoo loo baahan yahay, ruux kastana waxaa laasimi oo la xidhiidhi camalkiisa, qiyaamadana waxaa loo soo bixin kitaab uu la kulmo

isagoo fidsan, laguna dhihi akhri kitaabkaaga iyo xaashidaada, naftaadaa kuugu filan maanta xisaabe, saas darteed mar haddaan haysanno quraankan wanaagga ku toosin waa inaan qabsannaa oon raacnaa kuna fara adaygnaa. **[Al-Israa': 9-14].**

مَّنِ ٱهۡتَدَىٰ فَإِنَّمَا يَهۡتَدِي لِنَفۡسِهِۦۖ وَمَن ضَلَّ فَإِنَّمَا يَضِلُّ عَلَيۡهَاۚ وَلَا تَزِرُ وَازِرَةٞ وِزۡرَ أُخۡرَىٰۗ وَمَا كُنَّا مُعَذِّبِينَ حَتَّىٰ نَبۡعَثَ رَسُولٗا ﴿١٥﴾

15. Ruuxii hanuuna wuxuu uun u hanuunay naftiisa kii dhumana wuxuu uun u dhumay naftiisa, mana xambaarto nafi dambi naf kale, mana cadaabno (qof ama qolo) intaan uga soo dirno rasuul.

وَإِذَآ أَرَدۡنَآ أَن نُّهۡلِكَ قَرۡيَةً أَمَرۡنَا مُتۡرَفِيهَا فَفَسَقُواْ فِيهَا فَحَقَّ عَلَيۡهَا ٱلۡقَوۡلُ فَدَمَّرۡنَٰهَا تَدۡمِيرٗا ﴿١٦﴾

16. Markaan doonno inaan halaagno qaryad waxaan farraa kuweeda loo nicmeeyey ee kibirsan "khayr iyo inay Alle adeecaan" markaasay ka faasiqoobaan waxaana ku sugnaada ciqaab waana tirtirraa tirtirid (oo halaag naa).

وَكَمۡ أَهۡلَكۡنَا مِنَ ٱلۡقُرُونِ مِنۢ بَعۡدِ نُوحٖۗ وَكَفَىٰ بِرَبِّكَ بِذُنُوبِ عِبَادِهِۦ خَبِيرَۢا بَصِيرٗا ﴿١٧﴾

17. Immisaan halaagnay quruun (Nabi) Nuux ka dib, Rabbigaa ayaana ugu filan dambiyada addoommadiisa ogaade arka.

مَّن كَانَ يُرِيدُ ٱلۡعَاجِلَةَ عَجَّلۡنَا لَهُۥ فِيهَا مَا نَشَآءُ لِمَن نُّرِيدُ ثُمَّ جَعَلۡنَا لَهُۥ جَهَنَّمَ يَصۡلَىٰهَا مَذۡمُومٗا مَّدۡحُورٗا ﴿١٨﴾

18. Ruuxii dooni adduunyo waan ugu soo dedejinnaa dhexdeeda waxaan doonno ciddaan doonno, markaasaan ka yeellaa jahannamo mid gala isagoo caayan oo dullaysan.

وَمَنۡ أَرَادَ ٱلۡأٓخِرَةَ وَسَعَىٰ لَهَا سَعۡيَهَا وَهُوَ مُؤۡمِنٞ فَأُوْلَٰٓئِكَ كَانَ سَعۡيُهُم مَّشۡكُورٗا ﴿١٩﴾

19. Ciddiise doonta aakhiro oo fala camalkeedii isagoo mu'mina kuwaas camalkoodu wuxuu noqon mid la mahdiyo.

Ciddii hanuunta wuxuu uun wax u taray naftiisa, tii dhuntana waxay uun dhibtay nafteeda, nafna ma qaaddo dambi naf kale, Alle na dadka ma cadaabo isagoon u soo dirin rasuul xaqa u caddeeya oo tusiya jidka toosan, markii Alle halaagi magaalo ama umadna waxaa xaqa iyo wanaagga diida oo ka faasiqooba kuwa xoolaha loogu nicmeeyey iyo kuwo xun oo madax ah, markaasay ciqaabtii Alle ku dhacdaa, lana halaagaa halaag dhaba, in badan yuuna Alle halaagay quruumo Nabi Nuux ka dib, Alle na ogaansho iyo arkid ugu filan dambiyada addoommadiisa, ciddii jecel oo camalkiisa la dooni adduunyo iyo dhalanteedka, wuxuu Alle ka siiyaa wax cidduu doono wuxuu doono, markaasuu galiyaa jahannamo isagoo caayan oo dullaysan, ciddiise doonta aakhiro oo u camal fasha isagoo mu'min xaqa rumeeyey ah kaasi waa mid la mahdiyo camalkiisa, taasina waxay ku tusin in naf walba iyadu masuulka koobaad iska tahay nacfi iyo dhibba, xumaanta ku kibirka xoolaha iyo ladnaanta iyo awoodda iyo inay ciqaab sabab u noqon, inaan Alle ciqaabin dadka isagoon xaqa u caddayn, in ummado badan la halaagay Nabi Nuux ka dib, adduunyo uun ruuxii doonana wuxuu ka heli wuxuu Alle doono, waxaana u dambayn naar isagoo caayan oo dullaysan, ruuxiise la doona camalkiisa aakhiro camalna u fala isagoo mu'min ah oo raaci Nabiga camalkiisa iyo islaamka, wuu mahdin camalkiisa lana mahdin, adduunyadana in kastooy xaq tahay in xalaasha si fiican looga doono haddana ma aha in laga dabo dhaco oo lagu waasho xalaal iyo xaaraan.

Waxaa xadiith ah: adduunku waa guri cidaan guri lahayn iyo xoolo ruuxaan xoolo lahayn, waxaana u kulmiya cidaan caqli lahayn. Axmad iyo qeyrkii ayaa weriyay, mana xoog badna **[Al-Israa': 15-19].**

كُلًّا نُّمِدُّ هَٰٓؤُلَآءِ وَهَٰٓؤُلَآءِ مِنْ عَطَآءِ رَبِّكَ ۚ وَمَا كَانَ عَطَآءُ رَبِّكَ مَحْظُورًا ﴿٢٠﴾

20. Dhammaan waxbaan uga fidinnaa kuwaas (doona adduun) iyo kuwaas (doona aakhiro) siismada Allehaa, mana aha siismada Allehaa mid reebban.

ٱنظُرْ كَيْفَ فَضَّلْنَا بَعْضَهُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ ۚ وَلَلْءَاخِرَةُ أَكْبَرُ دَرَجَٰتٍ وَأَكْبَرُ تَفْضِيلًا ﴿٢١﴾

21. Day sidaan uga fadilnay qaarkood qaarka (kale) (addunka), aakharaase wayn darajooyin oo wayn fadilid.

لَّا تَجْعَلْ مَعَ ٱللَّهِ إِلَٰهًا ءَاخَرَ فَتَقْعُدَ مَذْمُومًا مَّخْذُولًا ﴿٢٢﴾

22. Ha yeelin Alle miciisa ilaah kale ood noqotid mid caayan oon loo gargaarin.

* وَقَضَىٰ رَبُّكَ أَلَّا تَعْبُدُوٓا۟ إِلَّآ إِيَّاهُ وَبِٱلْوَٰلِدَيْنِ إِحْسَٰنًا ۚ إِمَّا يَبْلُغَنَّ

23. Wuxuu faray Allehaa inaydaan caabudin isaga mooyee iyo inaad u samo fashaan labadii waalid

عِندَكَ ٱلْكِبَرَ أَحَدُهُمَآ أَوْ كِلَاهُمَا فَلَا تَقُل لَّهُمَآ أُفٍّ وَلَا تَنْهَرْهُمَا وَقُل لَّهُمَا قَوْلًا كَرِيمًا ﴿٢٣﴾

samo falid, hadduu ku gaadho agtaada wayni midkood ama labaduba ha ku dhihin uf, hana canaanan una dheh hadal fiican.

وَٱخْفِضْ لَهُمَا جَنَاحَ ٱلذُّلِّ مِنَ ٱلرَّحْمَةِ وَقُل رَّبِّ ٱرْحَمْهُمَا كَمَا رَبَّيَانِى صَغِيرًا ﴿٢٤﴾

24. Una raarici (jilci) garab naxariiseed (u naxariiso) dhehna Rabbiyow ugu naxariiso siday ii koriyeen anoo yar.

رَّبُّكُمْ أَعْلَمُ بِمَا فِى نُفُوسِكُمْ ۚ إِن تَكُونُوا۟ صَٰلِحِينَ فَإِنَّهُۥ كَانَ لِلْأَوَّٰبِينَ غَفُورًا ﴿٢٥﴾

25. Rabbigiin wuu og yahay waxa naftiinna ku sugan, haddaad suubban tihiin isagu kuwa toobad keenka badan wuu u dhaafaa «dambiga».

Cid walba Alle wuu ka siin adduunka wuxuu doono, cidnana kama reebbana deeqda adduun ee Alle, waana lagu kala duwan yahay adduunka: mid xoolo leh mid saboola, mid fayow mid buka iyo waxyaale kale, aakharaase darajo wayn oo fadli badan, sida xadiith ku sugnaaday in dadka darajooyinka sare ay u arki kuwa kale sida xiddiga jahada cirka. Waana in Alle kaliya la caabudo oon ilaah kale lala caabudin si uusan ruuxu u noqon mid caayan, oo khasaara, Alle na wuxuu xukumay in isaga kaliya la caabudo, labada waalidna loo samo falo, haddii midkood ama labadubana agtaada ku da'oobaan ha nicin oo karaahiyeysan, hana ku dhihin hadal xun sida uf iyo wixii la mida, hana canaanan, hadal fiicanna u dheh, una naxariiso, Alle na ka bari inuu u naxariisto siday kuugu naxariisteen kuuna koriyeen yaraantaadii, Alle na wuu og yahay waxa naftiinna ku sugan, haddaad wanaagsan tihiinna Alle ayaa u dambi dhaafaa kuwa u toobad keena, bal day sida islaamku u wayneeyey xaqa waalidka, diintee iyo nadaamkee laga heli naxariistaa iyo qaddarintaa inta lala xidhiidhiyey xaqa Alle, saas darteed waa in si dhaba loo garto islaamka looguna dhaqmo, waalidkana loo ixtiraamo loona naxariisto, waxaana xadiithyo badan ku sugnaaday addeecidda waalidka iyo xumaanta caasigooda sida ruuxii soo gaadha labadiisii waalid ama midkood oo naar gala, Alle ha ku fogeeyo (Abuu Daa'uud) iyo jannadu lugta hooyaday ku hoos jirtaa, (Imaam Axmed). aaway kuwa ku qaylyi u roonida haweenka, mase waa sawaxan aan riiqid lahayn iyo been cad. **[Al-Israa': 20-25].**

وَءَاتِ ذَا ٱلْقُرْبَىٰ حَقَّهُۥ وَٱلْمِسْكِينَ وَٱبْنَ ٱلسَّبِيلِ وَلَا تُبَذِّرْ تَبْذِيرًا ﴿٢٦﴾

26. Sii qaraabada xaqeeda iyo miskiinka iyo socdaalka, hana ku xadgudbin bixinta xoolaha xadgudub (iyo si xun).

27. Illeen kuwa ku xadgudba waa walaalo shaydaane, shaydaanna Allehiis wuu ka gaaloobay.

إِنَّ ٱلْمُبَذِّرِينَ كَانُوٓاْ إِخْوَٰنَ ٱلشَّيَٰطِينِ ۖ وَكَانَ ٱلشَّيْطَٰنُ لِرَبِّهِۦ كَفُورًا ﴿٢٧﴾

28. Haddaad ka jeedsato xaggooda (wax la'aan) adoo doonaya naxariista Allehaa ood rajayn waxaad ku dhahdaa hadal fudud (fiican).

وَإِمَّا تُعْرِضَنَّ عَنْهُمُ ٱبْتِغَآءَ رَحْمَةٍ مِّن رَّبِّكَ تَرْجُوهَا فَقُل لَّهُمْ قَوْلًا مَّيْسُورًا ﴿٢٨﴾

29. Ha ka yeelin gacantaada mid ku xidhan luquntaada hana wada fidin dhammaan ood noqoto mid la dagaalo oo tabar gaba.

وَلَا تَجْعَلْ يَدَكَ مَغْلُولَةً إِلَىٰ عُنُقِكَ وَلَا تَبْسُطْهَا كُلَّ ٱلْبَسْطِ فَتَقْعُدَ مَلُومًا مَّحْسُورًا ﴿٢٩﴾

30. Allehaa wuu u fidiyaa risqiga cidduu doono wuuna u qaddaraa «cidhiidhyaa» (cidduu doono) illeen Alle addoommadiisa waa oge arkee.

إِنَّ رَبَّكَ يَبْسُطُ ٱلرِّزْقَ لِمَن يَشَآءُ وَيَقْدِرُ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ بِعِبَادِهِۦ خَبِيرًۢا بَصِيرًا ﴿٣٠﴾

31. Ha dilina carruurtiinna ka cabsi faqri (saboolnimo) annagaa arsaaqaynna iyaga iyo idinkaba dilkooduna waa gaf wayn.

وَلَا تَقْتُلُوٓاْ أَوْلَٰدَكُمْ خَشْيَةَ إِمْلَٰقٍ ۖ نَّحْنُ نَرْزُقُهُمْ وَإِيَّاكُمْ ۚ إِنَّ قَتْلَهُمْ كَانَ خِطْـًٔا كَبِيرًا ﴿٣١﴾

Qaraabada, masaakiinta iyo musaafirkaba waa in la xidhiidhiyo waxna la siiyo, lana xadgudbin ee si fiican wax loo bixiyo, illeen mubadar waa walaal shaydaane, shaydaan waa mid Alle ka gaalooba, haddaadan wax haynna hadal fudud oo fiican ku dheh, waxaana xadiith ah: ruuxii jecel in loo waasiciyo risqiga cimrigana loo dheereeyo ha xidhidhiyo qaraabadiisa. Waana in wax bixintu dhexdhexaad ahaato, oodan gacanta luqunta ku xidhin bakhaylnimo, wada fidinna oo logu naco, ama fadhiisatid illeen risqigana Alle ayaa haya oo u fidiya cidduu doono una qaddara tuu doono imtixaan, wuuna og yahay addoommadiisa iyo maslaxaddooda, waase in wax la bixiyo oo la sadaqaysto. Abuuhurayre wuxuu ka wariyay Rasuulka (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): subax kasta oo addoomuhu soo toosaan waxaa dhawaaqi labo malag oo mid dhihi Allow wax bixiye badel sii, kan kalana dhihi Allow hayste halaag sii. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim. Tan kale waa inaan la

layn carruurta siday falayeen jaahiliintu iyagoo faqri ka yaabi illeen Alle ayaa dhammaan arsaaqee, dilkooduna waa gaf wayn oo xune, waana dambi daran oo adag sida cad. **[Al-Israa': 26-31].**

وَلَا تَقْرَبُوا۟ ٱلزِّنَىٰٓ إِنَّهُۥ كَانَ فَٰحِشَةً وَسَآءَ سَبِيلًا ﴿٣٢﴾

32. Ha u dhawaannina sino illeen waa xumaane waddana u xune.

وَلَا تَقْتُلُوا۟ ٱلنَّفْسَ ٱلَّتِى حَرَّمَ ٱللَّهُ إِلَّا بِٱلْحَقِّ ۗ وَمَن قُتِلَ مَظْلُومًا فَقَدْ جَعَلْنَا لِوَلِيِّهِۦ سُلْطَٰنًا فَلَا يُسْرِف فِّى ٱلْقَتْلِ ۖ إِنَّهُۥ كَانَ مَنصُورًا ﴿٣٣﴾

33. Hana dilina nafta Alle xarrimay xaq mooyee, ruuxii lagu dilo gardarro waxaan u yeellay waligiisa xujo ee yuusan ku xad gudbin dilka waa loo gargaaraye.

وَلَا تَقْرَبُوا۟ مَالَ ٱلْيَتِيمِ إِلَّا بِٱلَّتِى هِىَ أَحْسَنُ حَتَّىٰ يَبْلُغَ أَشُدَّهُۥ ۚ وَأَوْفُوا۟ بِٱلْعَهْدِ ۖ إِنَّ ٱلْعَهْدَ كَانَ مَسْـُٔولًا ﴿٣٤﴾

34. Hana u dhawaannina xoolaha agoonta sida u fiican mooyee intay ka gaadhaan xooggooda, oofiyana ballanka illeen ballanka waa lays warsane.

وَأَوْفُوا۟ ٱلْكَيْلَ إِذَا كِلْتُمْ وَزِنُوا۟ بِٱلْقِسْطَاسِ ٱلْمُسْتَقِيمِ ۚ ذَٰلِكَ خَيْرٌ وَأَحْسَنُ تَأْوِيلًا ﴿٣٥﴾

35. Oofiyana kaylka «beegidda» markaad beegaysaan kuna miisaama miisaan toosan (caadila), saasaa khayr roon oo fiican cidhibe.

وَلَا تَقْفُ مَا لَيْسَ لَكَ بِهِۦ عِلْمٌ ۚ إِنَّ ٱلسَّمْعَ وَٱلْبَصَرَ وَٱلْفُؤَادَ كُلُّ أُو۟لَٰٓئِكَ كَانَ عَنْهُ مَسْـُٔولًا ﴿٣٦﴾

36. Hana dhihin (raacraacin) waxaadan u cilmi lahayn, illeen maqalka, aragga iyo qalbigaba waa lays warsane.

وَلَا تَمْشِ فِى ٱلْأَرْضِ مَرَحًا ۖ إِنَّكَ لَن تَخْرِقَ ٱلْأَرْضَ وَلَن تَبْلُغَ ٱلْجِبَالَ طُولًا ﴿٣٧﴾

37. Hana u soconnin dhulka kibir illeen ma jeexi kartid dhulka kumana gaadhaysid buuraha dherare.

كُلُّ ذَٰلِكَ كَانَ سَيِّئُهُۥ عِندَ رَبِّكَ مَكْرُوهًا ﴿٣٨﴾

38. Dhammaan waxaasna xumaantiisu Allehaa agtiisa waa lagu neceb yahay.

Zinadu waa dulli, xaaraan iyo halaag, waana in laga fogaado, illeen danbi ka wayn zino gaalnimo mooyee ma jiree, sida Nabigu yidhi, sidoo kale waa inaan xaq darro naf lagu dilin. Sunan waxaa ku sugnaaday (xadiith): adduunkoo rogmada yaa ka fudud Alle agtiisa naf muslim ah dilkeed. Cidda waliga u ah ruuxa la dilana yuusan ku xadgubin qisaasta, illeen waa loo gargaaraye, xoolaha agoontana waa inaan loogu dhawaannin waxaan wanaag ahayn intay ka xoogaystaan illeen cuniddoodu waa naare, waana in ballanka la oofiyo, illeen waa lays warsane, kaylka beegidda iyo miisaankana la oofiyaa si fiican oo toosanna loo sameeyaa illeen saasaa fiican oo cidhib roone, waana inaan la sheegin waxaan loo cilmi lahayn, illeen maqalka, aragga iyo qalbigaba waa lays warsane, tan kale waa inaan dhulka, Alle isla wayni iyo kibir lagu soconin, maxaa faa'iida ah oo ku jira mar haddaadan dhulka duleelinayn ama buuraha dherer ku gaarayn, illeen miskiin baa tahay hays dhibin si habsanna u soco, waadna u jeeddaa aayadahan waxa ku sugan, waxaase loo baahan yahay in la raaco dardaaranka. **[Al-Israa': 32-38].**

ذَٰلِكَ مِمَّآ أَوۡحَىٰٓ إِلَيۡكَ رَبُّكَ مِنَ ٱلۡحِكۡمَةِۗ وَلَا تَجۡعَلۡ مَعَ ٱللَّهِ إِلَٰهًا ءَاخَرَ فَتُلۡقَىٰ فِي جَهَنَّمَ مَلُومٗا مَّدۡحُورًا ٣٩

39. Arrintaasu waa waxa Allehaa kuu waxyooday oo xigmada, hana yeelin Alle la jirkiisa ilaah kale oo lagugu tuuro jahannamo adoo lagu dagaalay oo lagu fogeeyey.

أَفَأَصۡفَىٰكُمۡ رَبُّكُم بِٱلۡبَنِينَ وَٱتَّخَذَ مِنَ ٱلۡمَلَٰٓئِكَةِ إِنَٰثًاۚ إِنَّكُمۡ لَتَقُولُونَ قَوۡلًا عَظِيمٗا ٤٠

40. Ma wuxuu idiin doortay Allihiin wiilal oos ka yeeshay malaa'igta gabdho idinku waxaad ku hadlaysaan hadal wayn.

وَلَقَدۡ صَرَّفۡنَا فِي هَٰذَا ٱلۡقُرۡءَانِ لِيَذَّكَّرُواْ وَمَا يَزِيدُهُمۡ إِلَّا نُفُورٗا ٤١

41. Dhab ahaan waan ku caddaynay (gagadinnay) quraankan (wax badan) inay waantoobaan umase kordhiyo waxaan carar ahayn.

قُل لَّوۡ كَانَ مَعَهُۥٓ ءَالِهَةٞ كَمَا يَقُولُونَ إِذٗا لَّٱبۡتَغَوۡاْ إِلَىٰ ذِي ٱلۡعَرۡشِ سَبِيلٗا ٤٢

42. Waxaad dhahdaa haddii ay la jiraan Alle ilaahyo kale siday sheegi waxay ka dooni lahaayeen Allaha carshiga leh jid (cibaado ugu dhowaadaan).

سُبۡحَٰنَهُۥ وَتَعَٰلَىٰ عَمَّا يَقُولُونَ عُلُوّٗا كَبِيرٗا ٤٣

43. Alle ayaa ka nasahan kana sarreeya waxay sheegi sarrayn wayn.

تُسَبِّحُ لَهُ ٱلسَّمَٰوَٰتُ ٱلسَّبۡعُ وَٱلۡأَرۡضُ وَمَن فِيهِنَّۚ وَإِن مِّن شَيۡءٍ إِلَّا يُسَبِّحُ بِحَمۡدِهِۦ وَلَٰكِن لَّا تَفۡقَهُونَ تَسۡبِيحَهُمۡۚ إِنَّهُۥ كَانَ حَلِيمًا غَفُورٗا ﴿٤٤﴾

44. Waxaa u tasbiixsada (qaddariya) Alle samooyinka toddobada ah iyo dhulka iyo waxa u dhexeeya, waxaan Alle u tasbiixsanayn ama ku mahdinayna ma jiro, waydaanse garanayn tasbiixdooda, Alle na waa dulsame dambi dhaafa.

Waxaas wanaagsan ee Alle faray iyo waxyaalaha xun ee uu reebay waa waxa Alle u waxyooday Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee), tan kale waa inaan ilaahay cid kale lala caabudin wuxuu mudanyahayna la siinnin, oo ciddii saas yeeshaa lagu tuuri jahannamo isagoo la dagaalay oo la fogeeyey, Alle na uma doorin gaalada wiilal isna malaa'igta gabdho kama yeelan, waa hadal gafa oo wayn oo gaaladu dhahaan, quraankana Alle wax badan buu ku caddeeyey kuna soo celceliyey xaqa in dadku wacdoomo, daalimiintase waxaan carar ahayn uma siyaadin, Alle na waa kali, hadday illahyo kale la jiraan siday gaaladu sheegi waxay isku dayi lahaayeen inay awoodda Alle oo kale yeeshaan, ama haddii kale Allaha xaqa ah caabudaan iyana, Alle na waa ka nasahan yahay oo ka sarreeyaa waxay sheegi, waxaaba u tasbiixsada toddobada samo iyo dhulka iyo waxa ku sugan, wax kastana wuxuu u tasbiixsadaa kuna mahdiyaa Alle mase la kasayo tasbiixdooda, Allana waa dulsame dambi dhaafa, la yaabna ma leh in wax walba Alle weyneeyo xusana illeen isagaa awood leh oo ahaysiiyey. Anas wuxuu sheegay in Rasuulku (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) u galay dad gaadiid saaran oo la taagan, kuna kor sheekaysan, markaasuu ku yidhi Rasuulku (kora iyadoo nabad qabta oo daaya iyadoo nabad qabta, hana uga yeelannina sheekadiinna waddooyinka iyo suuqa kuraas (oo kale). Maxay jirtaa mid la korsan yahay oo ka khayr roon kan korsan, Alle na ka xusid badan. (Imaam Axmed). Alle ayaana awood leh. **[Al-Israa': 39-44].**

وَإِذَا قَرَأۡتَ ٱلۡقُرۡءَانَ جَعَلۡنَا بَيۡنَكَ وَبَيۡنَ ٱلَّذِينَ لَا يُؤۡمِنُونَ بِٱلۡأٓخِرَةِ حِجَابٗا مَّسۡتُورٗا ﴿٤٥﴾

45. Markaad akhriyi quraanka waxaan yeellaa dhexdaada iyo dhexda kuwaan rumeynin aakhiro xijaab (dayr) asturan.

وَجَعَلۡنَا عَلَىٰ قُلُوبِهِمۡ أَكِنَّةً أَن يَفۡقَهُوهُ وَفِيٓ ءَاذَانِهِمۡ وَقۡرٗاۚ وَإِذَا ذَكَرۡتَ رَبَّكَ فِي ٱلۡقُرۡءَانِ وَحۡدَهُۥ وَلَّوۡاْ عَلَىٰٓ أَدۡبَٰرِهِمۡ نُفُورٗا ﴿٤٦﴾

46. Waxaanna yeellay quluubtooda dabool inay kasaan quraanka, dhagohoodana culays, markaad ku xusto Rabbigaana quraanka kaligiis waxay u jeedsadaan gadaal iyagoo carari.

47. Annagaa og waxay dhagaysan markay ku dhagaysan adiga iyagoo faqi markay dhihi daalimiintu waxaan nin sixran ahayn ma raacaysaan.

نَّحْنُ أَعْلَمُ بِمَا يَسْتَمِعُونَ بِهِۦٓ إِذْ
يَسْتَمِعُونَ إِلَيْكَ وَإِذْ هُمْ نَجْوَىٰٓ إِذْ
يَقُولُ ٱلظَّٰلِمُونَ إِن تَتَّبِعُونَ إِلَّا رَجُلًا
مَّسْحُورًا ﴿٤٧﴾

48. Day siday kuugu yeelaan tusaalayaal oy u dhumeen oyna u karin jidka hanuunka.

ٱنظُرْ كَيْفَ ضَرَبُوا۟ لَكَ ٱلْأَمْثَالَ فَضَلُّوا۟
فَلَا يَسْتَطِيعُونَ سَبِيلًا ﴿٤٨﴾

49. Waxay dhaheen (gaaladii) ma markaan noqonno lafo iyo burbur yaa nalagu soo celin abuur cusub.

وَقَالُوٓا۟ أَءِذَا كُنَّا عِظَٰمًا وَرُفَٰتًا أَءِنَّا
لَمَبْعُوثُونَ خَلْقًا جَدِيدًا ﴿٤٩﴾

50. Waxaad dhahdaa noqda dhagax ama bir.

۞ قُلْ كُونُوا۟ حِجَارَةً أَوْ حَدِيدًا ﴿٥٠﴾

51. Ama khalqi (abuur) ku wayn laabtiinna, waxayna dhihi yaa na soo celin, ku dheh Allihii idin abuuray markii hore, waxayna kuu gilgili madaxooda iyagoo leh waa goorma isagu, waxaad dhahdaa waxaa suurowda inay dhawdahay.

أَوْ خَلْقًا مِّمَّا يَكْبُرُ فِى صُدُورِكُمْ ۚ
فَسَيَقُولُونَ مَن يُعِيدُنَا ۖ قُلِ ٱلَّذِى
فَطَرَكُمْ أَوَّلَ مَرَّةٍ ۚ فَسَيُنْغِضُونَ إِلَيْكَ
رُءُوسَهُمْ وَيَقُولُونَ مَتَىٰ هُوَ ۖ قُلْ عَسَىٰٓ
أَن يَكُونَ قَرِيبًا ﴿٥١﴾

52. Waana maalintuu idiin yeedhi Alle ood maqlaysaan isagoo mudan mahad una malaynaysaan inaydaan nagaannin wax yar mooyee.

يَوْمَ يَدْعُوكُمْ فَتَسْتَجِيبُونَ بِحَمْدِهِۦ
وَتَظُنُّونَ إِن لَّبِثْتُمْ إِلَّا قَلِيلًا ﴿٥٢﴾

Gaaladu xaqa iyo quraanka way ka madax adaygi oo xijaabaa ka xiga xaggiisa, qulubtooduna way daboolan tahay, mana fahminayso quraanka, Alle kaliya marka la sheegana way cararaan iyagoo dooni in waxyaalo kale lala sheego, Alle ayaa og waxay dhagaysan iyo markay faqi, sheegina daalimiintu in Nabigu yahay nin sixran waxyaalo tusaalooyin ahna way u yeeleen, waxayse ka dhumeen xaqii iyo jidkii, mana karaan u noqosho xaq, waxayna diidaan in

la soo bixin iyagoo lafo iyo burbur noqday, waxay doonise ha noqdeen ama dhagax ama bir ama sida cirka iyo wixii la mida, waxaa uun idin soo celin Allihii markii hore idin abuuray, waxayna madaxa la ruxaan kibir iyo isla wayni iyagoo warsan goortuu dhici xaalku, waxaase suurowda inuu dhaw yahay, maalintase Alle ugu yeedhi kulanka qiyaame way maqli iyagoo ammaani una malayn inayna ku nagaannin adduunkii wax yar mooyee, waana kaas quraankii, Nabigii, siday gaalo u diideen, siday u dhagreen, siday soo bixinta u diideen, Alle ayaase soo celin, qiyaamana wataas, madax ruxii, isla waynidii iyo xaq diidna waxaa ka dambayn khasaare iyo luggooyo. Akhri qisada Abuu Sufyaan, Abuu Jahal iyo Akhnas iyo siday u dhagaysteen quraanka iyagoo kala gabban iyo siday isu warsadeen iyo hadalkii xumaa ee Abuu Jahal, xaqii baase hadhay xumaanna tagtay. **[Al-Israa': 45-52].**

53. Waxaad ku dhahdaa addoommadayda ha dheheen sida u fiican, shaydaanku wuu fasaadin dhexdiinnee, shaydaanna dadka col cad buu u yahay.

وَقُل لِّعِبَادِى يَقُولُوا۟ ٱلَّتِى هِىَ أَحْسَنُ ۚ إِنَّ ٱلشَّيْطَٰنَ يَنزَغُ بَيْنَهُمْ ۚ إِنَّ ٱلشَّيْطَٰنَ كَانَ لِلْإِنسَٰنِ عَدُوًّا مُّبِينًا ﴿٥٣﴾

54. Rabbigiinaa idin og (waxaad tihiin) hadduu doono wuu idiin naxariisan, hadduu doonana wuu idin cadaabi, kuugumana aannaan dirin inaad wakiil (ilaaliye u noqoto).

رَّبُّكُمْ أَعْلَمُ بِكُمْ ۖ إِن يَشَأْ يَرْحَمْكُمْ أَوْ إِن يَشَأْ يُعَذِّبْكُمْ ۚ وَمَآ أَرْسَلْنَٰكَ عَلَيْهِمْ وَكِيلًا ﴿٥٤﴾

55. Rabbigaana waa og yahay waxa ku sugan samooyinka iyo dhulka, dhab ahaan baanna uga fadilnay Nabiyada qaarkood qaarka (kale), waxaanna siinnay Nabi Daawuud Zabuur.

وَرَبُّكَ أَعْلَمُ بِمَن فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۗ وَلَقَدْ فَضَّلْنَا بَعْضَ ٱلنَّبِيِّۦنَ عَلَىٰ بَعْضٍ ۖ وَءَاتَيْنَا دَاوُۥدَ زَبُورًا ﴿٥٥﴾

56. Waxaad dhahdaa u yeedha kuwaad sheegateen oo Alle ka soo hadhay ma hantaan inay idinka faydaan dhib ama idinka wareejiyaan.

قُلِ ٱدْعُوا۟ ٱلَّذِينَ زَعَمْتُم مِّن دُونِهِۦ فَلَا يَمْلِكُونَ كَشْفَ ٱلضُّرِّ عَنكُمْ وَلَا تَحْوِيلًا ﴿٥٦﴾

أُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ يَدْعُونَ يَبْتَغُونَ إِلَىٰ رَبِّهِمُ ٱلْوَسِيلَةَ أَيُّهُمْ أَقْرَبُ وَيَرْجُونَ رَحْمَتَهُۥ وَيَخَافُونَ عَذَابَهُۥٓ ۚ إِنَّ عَذَابَ رَبِّكَ كَانَ مَحْذُورًا ﴿٥٧﴾

57. Kuwaas ay caabudina iyagaaba ka dooni xagga Alle u dhawaansho, (waxaana u dhowaanshaha Alle dooni) kuwooda Alle ugu dhawaansho badan, waxayna rajayn naxariistiisa, wayna ka cabsan cadaabkiisa, cadaabka Rabbigaana waa wax laga digtoonaado.

Alle na wuxuu faray addoommadiisa inay wanaag ku hadlaan, illeen shaydaanku dadka dhexdiisuu fasaadiyaaye, waana colka dadkee, Alle na waa og yahay xaalka dadka, naxariis iyo ciqaabba isagaa hanta, Nabigana waxaa loo diray gaadhsiinta xaqa, ee looma soo dirin inuu wakiil ka noqdo dadka, Alle na wuu og yahay waxa ku sugan cirka iyo dhulka, wuxuuna kala fadilay Nabiyada, Nabi Daawuudna wuxuu siiyey kitaabkii zabuur ahaa, wax Alle ka soo hadhay oo dhib faydi kara ama wareejin karana ma jiro, kuwa ay wax ka dayi ee ay baryi naftoodaa Alle u dhawaansho dooni oo masaakiina naxariistiisana rajayn kana cabsan cadaabkiisa, illeen cadaabka Alle waa laga digay, waana wax laga digtoonaado, taasina waxay muujin inay waajib tahay in hadal fiican lagu hadlo, in shaydaan laga digtoonaado, in naxariista Alle lagu dadaalo heliddeeda iyo in laga digtoonaado cadaabkiisa (Alle ayaa laga magan galaaye). **[Al-Israa': 53-57].**

وَإِن مِّن قَرْيَةٍ إِلَّا نَحْنُ مُهْلِكُوهَا قَبْلَ يَوْمِ ٱلْقِيَٰمَةِ أَوْ مُعَذِّبُوهَا عَذَابًا شَدِيدًا ۚ كَانَ ذَٰلِكَ فِى ٱلْكِتَٰبِ مَسْطُورًا ﴿٥٨﴾

58. Qaryo (magaalo) aannaan halaagayn ma jirto ka hor qiyaamada ama aan la cadaabayn (ciqaabayn) cadaab daran, waana arrin ku qoran kitaabka (looxul maxfuudka).

وَمَا مَنَعَنَآ أَن نُّرْسِلَ بِٱلْـَٔايَٰتِ إِلَّآ أَن كَذَّبَ بِهَا ٱلْأَوَّلُونَ ۚ وَءَاتَيْنَا ثَمُودَ ٱلنَّاقَةَ مُبْصِرَةً فَظَلَمُوا۟ بِهَا ۚ وَمَا نُرْسِلُ بِٱلْـَٔايَٰتِ إِلَّا تَخْوِيفًا ﴿٥٩﴾

59. Umana aannaan daynin soo diridda aayado (mucjiso) inay beeniyeen kuwii hore mooyee, waxaanna siinnay Thamuud hashii oo wax tusisa wayna ku dulmi faleen (ka gaaloobeen), aayadaha waxaan cabsi galin ahayn uma soo dirro (dejinno).

وَإِذْ قُلْنَا لَكَ إِنَّ رَبَّكَ أَحَاطَ بِٱلنَّاسِ ۚ وَمَا جَعَلْنَا ٱلرُّءْيَا ٱلَّتِىٓ أَرَيْنَٰكَ إِلَّا فِتْنَةً لِّلنَّاسِ وَٱلشَّجَرَةَ ٱلْمَلْعُونَةَ فِى ٱلْقُرْءَانِ ۚ وَنُخَوِّفُهُمْ فَمَا يَزِيدُهُمْ إِلَّا طُغْيَٰنًا كَبِيرًا ﴿٦٠﴾

60. (Xusuuso) markaan kugu nidhi Allehaa wuxuu koobaa dadka, kamana aannaan yeelin riyadaan ku tusinnay fidmada dadka mooyee (imtixaan) iyo geedka lagu lacnaday quraanka, waanu ku cabsiin umana siyaadiyo waxaan xadgudub wayn ahayn.

وَإِذْ قُلْنَا لِلْمَلَٰٓئِكَةِ ٱسْجُدُوا۟ لِءَادَمَ فَسَجَدُوٓا۟ إِلَّآ إِبْلِيسَ قَالَ ءَأَسْجُدُ لِمَنْ خَلَقْتَ طِينًا ﴿٦١﴾

61. (Xusuuso) markaan ku nidhi malaa'igta u sujuuda Aadan oy sujuudeen Ibliis moyee, oo yidhi ma waxaan u sujuudi waxaad abuurtay isagoo dhooba ah.

قَالَ أَرَءَيْتَكَ هَٰذَا ٱلَّذِى كَرَّمْتَ عَلَىَّ لَئِنْ أَخَّرْتَنِ إِلَىٰ يَوْمِ ٱلْقِيَٰمَةِ لَأَحْتَنِكَنَّ ذُرِّيَّتَهُۥٓ إِلَّا قَلِيلًا ﴿٦٢﴾

62. Wuxuuna yidhi ka warran kan aad iga sharriftay, haddaad dib ii dhigto tan iyo qiyaamada waxaan ka adkaan (dhumin) faraciisa wax yar mooyee.

Magaalo kasta waaxaa u dambeeya halaag qiyaamada ka hor ama ciqaab daran, waana xaal ku qoran luuxul maxfuudka, Alle na wuxuu u daayey soo dejinta mucjisadaha waxaa beeniyey kuwii hore, waxaana ka mid ahaa hashii reer Thamuud loo soo bixiyey ee ku tusinaysay awoodda Alle, wayna ka gaaloobeen. Waxayna gaaladii Makaad warsadeen Nabiga waxyaalo ay ku dhibayeen sida in buuraha dahab looga dhigo, iyo togog loo jeexo iyo waxyaalo kale, mucjisadana Alle wuxuu u soo dejiyaa cabsiin riyaduu Nabigu arkay iyo geedka lagu lacnaday quraankana waa imtixaan, Alle na wuu koobay dadka, wuuna cabsiin, badankoodse way xadgudbaan oo fasaadka badiyaan. Qisada sujuudda malaa'igta iyo diidada Ibliisna waxaa lagu sheegay toddobo suuradood, waxaase loo baahan yahay in lagu waano qaato, Ibliisna laga digtoonaado, xaqana lagu tooso. **[Al-Israa': 58-62].**

قَالَ ٱذْهَبْ فَمَن تَبِعَكَ مِنْهُمْ فَإِنَّ جَهَنَّمَ جَزَآؤُكُمْ جَزَآءً مَّوْفُورًا ﴿٦٣﴾

63. Alle wuxuu ku yidhi: tag ciddii ku raacda oo ka midana jahannamaa jasihiisu yahay abaal marin dhamaystiran.

وَٱسْتَفْزِزْ مَنِ ٱسْتَطَعْتَ مِنْهُم بِصَوْتِكَ وَأَجْلِبْ عَلَيْهِم بِخَيْلِكَ وَرَجِلِكَ وَشَارِكْهُمْ فِى ٱلْأَمْوَٰلِ وَٱلْأَوْلَٰدِ وَعِدْهُمْ ۚ وَمَا يَعِدُهُمُ ٱلشَّيْطَٰنُ إِلَّا غُرُورًا ﴿٦٤﴾

64. Ku duufso ciddaad karto oo ka mida codkaaga kuna qeyli adigoo ku kaxeysanaya fardoolaydaada iyo ciidankaaga lugaynaya lana wadaag xoolaha iyo carruurta una yabooh, mana yabooho shaydaan waxaan dhagar ahayn (iyo baadi).

إِنَّ عِبَادِى لَيْسَ لَكَ عَلَيْهِمْ سُلْطَٰنٌ ۚ وَكَفَىٰ بِرَبِّكَ وَكِيلًا ﴿٦٥﴾

65. Addoommadayda kuma lihid xujo, Rabbigaana (Nabiyow) waa ku filan yahay wakiil (ilaaliye).

رَّبُّكُمُ ٱلَّذِى يُزْجِى لَكُمُ ٱلْفُلْكَ فِى ٱلْبَحْرِ لِتَبْتَغُوا۟ مِن فَضْلِهِۦٓ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ بِكُمْ رَحِيمًا ﴿٦٦﴾

66. Allihiin waa kan idiin socodsiiya doonyaha badda dhexdeeda inaad doonataan fadligiisa (risqi), Alle na waa idiin naxariiste.

وَإِذَا مَسَّكُمُ ٱلضُّرُّ فِى ٱلْبَحْرِ ضَلَّ مَن تَدْعُونَ إِلَّآ إِيَّاهُ ۖ فَلَمَّا نَجَّىٰكُمْ إِلَى ٱلْبَرِّ أَعْرَضْتُمْ ۚ وَكَانَ ٱلْإِنسَٰنُ كَفُورًا ﴿٦٧﴾

67. Markuu idinku taabto badda dhibna wuu dhumaa waxaad baryeyseen Alle mooyee, markuu idiin soo koriyo barrigana waad jeedsataan, dadkuna waa gaalnimo badane.

Alle wuxuu ugu jawaabay tag adiga iyo inta ku raacda naarta jahannamaa abaal loo dhammeeyey looga dhigiye, kuna duufso ciddaad karto codkaaga oo hees, durbaan iyo cid kastoo xumaan u yeedhi, kuna kaxayso fardahaaga iyo lugtaada lana wadaag xoolaha iyo carruurta, wuxuu yidhi Ibnu Cabbaas: xoolo la wadaagiddu waa xumaanta ay ku bixiyaan, Xasan Basrina wuxuu yidhi: waa kasabkeeda xaaraan iyo ku bixin dambi, la wadaagidda carruurtana waa dayiciddooda iyo xumayn akhalaaqdooda, siduu yidhi Xasan Basri, waa gaalaynta iyo lslaamka ka bixinta, yabooha shaydaanna waa luggooyo, addoommada Alle ee fiicanse xujo kuma leh, Alle ayaana wakiil ku filan, nicmooyinkiisa waxaa ka mida inuu badda u sahlay dadka kuna maraan markab iyagoo fadliga iyo risqiga Alle raadsan. Waana u naxariistaa ummaddiisa, markuu dhib ku taabto baddana waxay halmaamaan wax kastooy baryayeen oo Alle ka soo hadhay, markay barriga tagaanna way jeedsadaan, dadkuna waa gaalnimo badan yahay. Saas darteed waa in laga digtoonaado shaydaan iyo jidkiisa, waa in xoolaha iyo carruurta xumaan laga dhawraa, nicmooyinka Alle na lagu mahdiyaa. **[Al-Israa': 63-67].**

أَفَأَمِنتُمْ أَن يَخْسِفَ بِكُمْ جَانِبَ ٱلْبَرِّ أَوْ يُرْسِلَ عَلَيْكُمْ حَاصِبًا ثُمَّ لَا تَجِدُوا۟ لَكُمْ وَكِيلًا ﴿٦٨﴾

68. Miyaad ka aamin noqoteen in Alle idinla gooyo dhinac dhulka ka mida, ama idinku soo diro dabayl qururux wadda markaas aydaan helin wakiil.

أَمْ أَمِنتُمْ أَن يُعِيدَكُمْ فِيهِ تَارَةً أُخْرَىٰ فَيُرْسِلَ عَلَيْكُمْ قَاصِفًا مِّنَ ٱلرِّيحِ فَيُغْرِقَكُم بِمَا كَفَرْتُمْ ثُمَّ لَا تَجِدُوا۟ لَكُمْ عَلَيْنَا بِهِۦ تَبِيعًا ﴿٦٩﴾

69. Miyaadse ka aamin noqoteen inuu idinku celiyo (badda) mar kale oos idinku diro dabayl (wax jajabisa) oos idin maansheeyo gaalnimadiinna darteed, markaas aydaan u helin wax noo raacda.

* وَلَقَدْ كَرَّمْنَا بَنِىٓ ءَادَمَ وَحَمَلْنَٰهُمْ فِى ٱلْبَرِّ وَٱلْبَحْرِ وَرَزَقْنَٰهُم مِّنَ ٱلطَّيِّبَٰتِ وَفَضَّلْنَٰهُمْ عَلَىٰ كَثِيرٍ مِّمَّنْ خَلَقْنَا تَفْضِيلًا ﴿٧٠﴾

70. Dhabbaannu u sharrifnay binii Aadamka waxaanna ku xambaarray barriga iyo baddaba waxaanna ku arsaaqnay wanaag, waxaanna ka fadilnay wax badan oo ka mida waxaan abuurray fadilaad.

يَوْمَ نَدْعُوا۟ كُلَّ أُنَاسٍۭ بِإِمَٰمِهِمْ ۖ فَمَنْ أُوتِىَ كِتَٰبَهُۥ بِيَمِينِهِۦ فَأُو۟لَٰٓئِكَ يَقْرَءُونَ كِتَٰبَهُمْ وَلَا يُظْلَمُونَ فَتِيلًا ﴿٧١﴾

71. (Xusuuso) maalintaan cid walba ugu yeedhayno imaamkeeda «kitaabka camalkooda ama Nabiga», ciddiise laga siiyo kitaabkiisa midigta kuwaasi way akhrin kitaabkooda lagamana dulmiyo wax la eg waxa ku jira halka ay laf timireedku ka jeexan tahay.

وَمَن كَانَ فِى هَٰذِهِۦٓ أَعْمَىٰ فَهُوَ فِى ٱلْءَاخِرَةِ أَعْمَىٰ وَأَضَلُّ سَبِيلًا ﴿٧٢﴾

72. Ciddiise adduunka ku indho la' (xaqa diidda) aakharana wuu indho la'aan oo ka dhumi jidka.

Cidna kama aammin aha ciqaabta Alle ama dhulka ha la gooyo ama badda ha ku maansheeyo iyo sidii kasta oo uu doono, wax ka daba kicina ma jiro, Alle na wuu sharrifay banii Aadamka, caqliga, abuurka, maqalka, aragga, iyo wax

yaale kale, wuxuuna u fududeeyey ku safarka iyo ku socodka barriga iyo badda, kuna arsaaqay wanaag, kana fadilay wax badan oo khalqiigiisa ah, cid walbana wuxuu Alle ugu yeedhi qiyaamada ama Nabigeedii ha noqdo ama kitaabkii loo soo dejiyey iyo camalkiisii, ciddase liibaani waa midda kitaabkeeda midigta laga siin oo akhrin iyagoo ku faraxsan oon la dhibaatayn, ciddiise xaqa ka indho la'ayd adduunka oo ka leexatay nuurka Alle aakharana way sii indho beeli oo khasaari, illeen horay bay xaqa uga soo indho beeshaye. Taasina waxay adkayn in Alle laga digtoonaado, in quraanka iyo Nabiga imaamma laga yeesho, in xaqa lagu dadaalo si aan loo dhumin loogana indho beelin adduun iyo aakhiraba, Alle na hanuun la warsado. **[Al-Israa': 68-72].**

73. Waxay u dhawaadeen gaaladii inay kaa fidmeeyaan waxaan kuu waxyoonnay inaad nagu been abuuratid wax kale, markaas ay kaa yeeshaan saaxiib.

وَإِن كَادُوا۟ لَيَفْتِنُونَكَ عَنِ ٱلَّذِىٓ أَوْحَيْنَآ إِلَيْكَ لِتَفْتَرِىَ عَلَيْنَا غَيْرَهُۥ ۖ وَإِذًا لَّٱتَّخَذُوكَ خَلِيلًا ﴿٧٣﴾

74. Hadaannan ku sugin waxaad u dhawaan lahayd inaad u iilato xaggooda wax yar.

وَلَوْلَآ أَن ثَبَّتْنَٰكَ لَقَدْ كِدتَّ تَرْكَنُ إِلَيْهِمْ شَيْـًٔا قَلِيلًا ﴿٧٤﴾

75. Markaasaan ku dhadhansiin lahayn (cadaab) labanlaaban nolosha adduun iyo mid labanlaaban geerida mana hesheen cid nooga kaa hiillisa.

إِذًا لَّأَذَقْنَٰكَ ضِعْفَ ٱلْحَيَوٰةِ وَضِعْفَ ٱلْمَمَاتِ ثُمَّ لَا تَجِدُ لَكَ عَلَيْنَا نَصِيرًا ﴿٧٥﴾

76. Waxayna u dhawaadeen inay kaa argagixiyaan dhulka inay kaa saaraan darteed, markaasna kumay nagaadeen dhulkaas gadaashaada wax yar mooyee.

وَإِن كَادُوا۟ لَيَسْتَفِزُّونَكَ مِنَ ٱلْأَرْضِ لِيُخْرِجُوكَ مِنْهَا ۖ وَإِذًا لَّا يَلْبَثُونَ خِلَٰفَكَ إِلَّا قَلِيلًا ﴿٧٦﴾

77. Waana sunnada rasuulladaan dirray hortaa, una heli maysid sunnadannada wax dooriya (leexin).

سُنَّةَ مَن قَدْ أَرْسَلْنَا قَبْلَكَ مِن رُّسُلِنَا ۖ وَلَا تَجِدُ لِسُنَّتِنَا تَحْوِيلًا ﴿٧٧﴾

Alle wuxuu ka warramay siduu ugu gargaaray Nabigiisa, una sugayay inkastoy gaaladii isku dayeen inay xaqa ka leexiyaan waxay rabaanna uu yeelo, ciddii muslin ah ee xaqa uga leexata gaalada darteedna si ay saaxiib ula noqdaan waa mid halaag iyo khasaare ku danbayn iyo ciqaab adduun iyo mid aakhiroba,

waxayna gaaladu had iyo jeer isku dayi in muslimiintu u soo dhawaadaan, waase dulli adduun iyo mid aakhiro iyo gargaarid la'aan, gaaladiina waxay isku dayeen inay Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ka saaraan dhulka miyayse kaga danbayn wax yar mooyee, saasayna u dhacday arrintii, waana sunnada Alle ee uu ku falay kuwuu horay u diray, wax baddali karana ma jiro, dadka wanaagsan la noolidooda waa tan fiican, markase dhulka ka madho wanaag iyo dadkiis waa uun halaag, ciqaab iyo khasaare sida dhacda. Aayaduhuna waxay adkayn: ku sugnaan xaqa, ka digtoonida u dhawaansho iyo la saaxiibidda gaalada, ka digtoonida in dadka fiican dhulka laga eryo (ama ha ku soo degto reer Makaad ama yuhuud waa arrin guud oo caama). **[Al-Israa': 73-77].**

أَقِمِ ٱلصَّلَوٰةَ لِدُلُوكِ ٱلشَّمۡسِ إِلَىٰ غَسَقِ ٱلَّيۡلِ وَقُرۡءَانَ ٱلۡفَجۡرِۖ إِنَّ قُرۡءَانَ ٱلۡفَجۡرِ كَانَ مَشۡهُودٗا ٧٨

78. Oog salaadda markay qorraxdu (cirka kala barkiisa ka) suusho ilaa madawga habeenka iyo quraanka (salaadda) waabariga, salaadda waabariguna waa mid (malaa'igtu) joogto.

وَمِنَ ٱلَّيۡلِ فَتَهَجَّدۡ بِهِۦ نَافِلَةٗ لَّكَ عَسَىٰٓ أَن يَبۡعَثَكَ رَبُّكَ مَقَامٗا مَّحۡمُودٗا ٧٩

79. Habeenkana tahajud (qaar tuko) isagoo dheeraad kuu ah, waxay u dhawdahay in Allehaa kuu soo bixiyo maqaam la mahadiyo (shafeecada).

وَقُل رَّبِّ أَدۡخِلۡنِي مُدۡخَلَ صِدۡقٖ وَأَخۡرِجۡنِي مُخۡرَجَ صِدۡقٖ وَٱجۡعَل لِّي مِن لَّدُنكَ سُلۡطَٰنٗا نَّصِيرٗا ٨٠

80. Waxaad dhahdaa Allow i gali gelin wanaagsan, ina bixi bixin wanaagsan, iigana yeel agtaada xujo iyo xoog ii gargaara.

وَقُلۡ جَآءَ ٱلۡحَقُّ وَزَهَقَ ٱلۡبَٰطِلُۚ إِنَّ ٱلۡبَٰطِلَ كَانَ زَهُوقٗا ٨١

81. Waxaad dhahdaa waxaa yimid xaqii waxaana tirtirmay baadhilkii, baadhilkiina wuxuu noqday mid la tirtiro.

وَنُنَزِّلُ مِنَ ٱلۡقُرۡءَانِ مَا هُوَ شِفَآءٞ وَرَحۡمَةٞ لِّلۡمُؤۡمِنِينَ وَلَا يَزِيدُ ٱلظَّٰلِمِينَ إِلَّا خَسَارٗا ٨٢

82. Waxaana soo dajinaynaa quraanka isagoo caafimaad iyo naxariis u ah mu'miniinta, daalimiintana uma siyaadiyo waxaan khasaare ahayn.

Aayaddu waxay sheegtay waqtiyada salaadda laga billaabo duhurkii ilaa subaxa, inkastoo xadiithyo badan caddeeyeen waqtiyadaas. Abuu Hurayrana wuxuu Nabiga ka wariyay (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) in salaadda subax malaa'igtii habeenka iyo tii maalintii xaadiri (oo joogi). (Imaam Axmed iyo kuwo kale yaa wariyay). Wuxuuna Alle faray Nabiga inuu si dheeraada u tukado habeenkii, inkastooy cid walba sunno u tahay inuu tukado habeenkii, hadana waxaa la sheegay inay Nabiga faral ku ahayd salaad u kicidda habeenkii, wuxuuna Alle ugu bishaareeyay Nabiga maqaam la mahadiyo, oo ah shafeecada qiyaamada marka Nabiyada la soo maro dhibaataduna darraato, war yaa shafeecana la is warsado sida xadiithyo badan ku sugnaatay, waxaana ka mida: waa lay idmi markaasaan dhihi wuxuu Alle doono inaan dhaho, waana maqaamka la mahadiyay. (Imaamu Axmed). Wuxuuna Alle Nabiga faray inuu warsado inuu meel fiicanna galiyo bixin fiicanna bixiyo, gargaarra siiyo, illeen xaqiibaa yimide, baadhilna wuu tirtirmaye, quraankuna waa daawada iyo naxariista mu'miniinta iyo khasaaraha daalimiinta iyo gaalada, ciddii raacdana waa u khayr tii ka leexatana waa u khasaare. **[Al-Israa': 78-82].**

وَإِذَآ أَنْعَمْنَا عَلَى ٱلْإِنسَٰنِ أَعْرَضَ وَنَـَٔا بِجَانِبِهِۦ وَإِذَا مَسَّهُ ٱلشَّرُّ كَانَ يَـُٔوسًا ﴿٨٣﴾

83. Markaan u nicmayno dadka wuu jeedsadaa (xaqa ka fogaadaa) haduu taabto dhibna wuu quustaa.

قُلْ كُلٌّ يَعْمَلُ عَلَىٰ شَاكِلَتِهِۦ فَرَبُّكُمْ أَعْلَمُ بِمَنْ هُوَ أَهْدَىٰ سَبِيلًا ﴿٨٤﴾

84. Waxaad dhahdaa cid kasta ha ku camal fasho jidkeeda (diinteeda) Rabbigiinbaa og cidda jidkeedu hanuun badan yahaye.

وَيَسْـَٔلُونَكَ عَنِ ٱلرُّوحِ ۖ قُلِ ٱلرُّوحُ مِنْ أَمْرِ رَبِّى وَمَآ أُوتِيتُم مِّنَ ٱلْعِلْمِ إِلَّا قَلِيلًا ﴿٨٥﴾

85. Waxay ku warsan ruuxda, dheh ruuxdu waa amarka Rabbigay cilmina wax yarbaa la idin siiyay.

وَلَئِن شِئْنَا لَنَذْهَبَنَّ بِٱلَّذِىٓ أَوْحَيْنَآ إِلَيْكَ ثُمَّ لَا تَجِدُ لَكَ بِهِۦ عَلَيْنَا وَكِيلًا ﴿٨٦﴾

86. Haddaan doonno waannu la tagi kaan kuu waxyoonnay (quraanka) markaasna uma helaysid korkannaga wakiil (gargaare).

إِلَّا رَحْمَةً مِّن رَّبِّكَ ۚ إِنَّ فَضْلَهُۥ كَانَ عَلَيْكَ كَبِيرًا ﴿٨٧﴾

87. Naxariista Allehaa mooyee, illeen fadligiisu korkaaga waa ku wayn yahaye.

88. Waxaad dhahdaa hadday u kulmaan insi iyo jinni inay la yimaadaan quraankan oo kale lama imaan karaan wax la mida qaarkood qaar haba caawiyee.

قُل لَّئِنِ ٱجْتَمَعَتِ ٱلْإِنسُ وَٱلْجِنُّ عَلَىٰٓ أَن يَأْتُوا۟ بِمِثْلِ هَٰذَا ٱلْقُرْءَانِ لَا يَأْتُونَ بِمِثْلِهِۦ وَلَوْ كَانَ بَعْضُهُمْ لِبَعْضٍ ظَهِيرًا ﴿٨٨﴾

89. Dhabbaan ugu caddaynay dadka quraanka tusaale kasta dadka badankiise wuu diiday gaalnimo mooyee.

وَلَقَدْ صَرَّفْنَا لِلنَّاسِ فِى هَٰذَا ٱلْقُرْءَانِ مِن كُلِّ مَثَلٍ فَأَبَىٰٓ أَكْثَرُ ٱلنَّاسِ إِلَّا كُفُورًا ﴿٨٩﴾

Dabeecada dadka badankiis waxaa ka mida inuu kibro oo xaqa ka jeedsado markuu ladan yahay, markuu dhib taabtana quustaa oon rajayn inuu khayr heli, cid walbase ha ku socoto waddadeeda illeen Alle wuu og yahay cidda hanuunsan iyo tan kale wuuna abaal marine, ruuxduna waa arrin amarka Alle ah oosan cidna barin, ciddii warsatayna saasaa loogu jawaabay ama reer makaad ha noqdeen ama yuhuudu ha ku kaalmaysee, dadkana cilmigoodu waa yar yahay inkastooy qaar ismoodaan inay cilmi badan yihiin, Alle ayaa laga magan galay ee wuxuu caddeeyey in hadduu doono uu la tagi quraanka cid u raacanna ayan jirin, Alle naxariistiisa mooyee oo fadliga Alle Rasuulka siiyey waa wayn yahay, hadday insi iyo jinniba kulmaan inay quraankoo kale keenaanna ma keeni karaan haba isugu kaalmeeyaane, quraankaan Alle wax badan yuu ku caddeeyey tusaale dadka badankiise diid waxaan gaalnimo ahayn, ceebayna ku tahay dadka inay markay ladan yihiin xaqa ka jeedsadaan, dhibkana quustaan, waxaan anfacaynna warsadaan, illeen Alle ayaa awood leh oo quraanka soo dejiyey, wax keeni wax ku soo dhawna ma jiro insi iyo jinni. **[Al-Israa': 83-89].**

90. Waxay dheheen gaaladii (makaad) ku rumayn mayno intaad nooga jeexdo dhulka ilo (burqan).

وَقَالُوا۟ لَن نُّؤْمِنَ لَكَ حَتَّىٰ تَفْجُرَ لَنَا مِنَ ٱلْأَرْضِ يَنۢبُوعًا ﴿٩٠﴾

91. Ama kuu ahaan beer timir iyo cinaba ood ku sii dayso dhexdeeda wabiyo socda.

أَوْ تَكُونَ لَكَ جَنَّةٌ مِّن نَّخِيلٍ وَعِنَبٍ فَتُفَجِّرَ ٱلْأَنْهَٰرَ خِلَٰلَهَا تَفْجِيرًا ﴿٩١﴾

92. Ama nagaga soo riddid samada saad sheegatay, goosimo iyadoo ah, ama u keentid Alle iyo malaa'igta si caddaana.

أَوْ تُسْقِطَ ٱلسَّمَآءَ كَمَا زَعَمْتَ عَلَيْنَا كِسَفًا أَوْ تَأْتِىَ بِٱللَّهِ وَٱلْمَلَٰٓئِكَةِ قَبِيلًا ﴿٩٢﴾

93. Ama kuu ahaado guri dahaba ama ka kortid samada, kuuna rumayn mayno koriddaada intaad noogaga soo dejisid kitaab aan akhrinno, waxaad dhahdaa Rabbigaybaa nasahane ma waxaan bashar (dad) Rasuula ahayn baan ahay.

أَوْ يَكُونَ لَكَ بَيْتٌ مِّن زُخْرُفٍ أَوْ تَرْقَىٰ فِي ٱلسَّمَآءِ وَلَن نُّؤْمِنَ لِرُقِيِّكَ حَتَّىٰ تُنَزِّلَ عَلَيْنَا كِتَٰبًا نَّقْرَؤُهُۥ ۗ قُلْ سُبْحَانَ رَبِّي هَلْ كُنتُ إِلَّا بَشَرًا رَّسُولًا ﴿٩٣﴾

94. Dadka uma diidin inay rumeeyaan markuu xaqu u yimid oon ahayn inay dhahaan ma wuxuu soo bixiyaa Alle bashar (dad) ah rasuullo.

وَمَا مَنَعَ ٱلنَّاسَ أَن يُؤْمِنُوٓا۟ إِذْ جَآءَهُمُ ٱلْهُدَىٰٓ إِلَّآ أَن قَالُوٓا۟ أَبَعَثَ ٱللَّهُ بَشَرًا رَّسُولًا ﴿٩٤﴾

95. Waxaad dhahdaa hadday dhulka yihiin malaa'ig ku xasilloon (deggan) waxaan uga soo dejin lahayn samada malag rasuula.

قُل لَّوْ كَانَ فِي ٱلْأَرْضِ مَلَٰٓئِكَةٌ يَمْشُونَ مُطْمَئِنِّينَ لَنَزَّلْنَا عَلَيْهِم مِّنَ ٱلسَّمَآءِ مَلَكًا رَّسُولًا ﴿٩٥﴾

Gaalada iyo kuwa caqliga yar waxay had iyo jeer dadka ku qiimeeyaan xoolaha iyo wixii soo raaca, saas darteed waxay u soo jeediyeen gaaladii Makaad Nabiga inuu ilo biyo ah u jeexo, ama beer barwaaqo ah u ahaato, ama cirka ku soo dumiyo iyagoo sheegi in Nabigu saas ku yidhi, ama guri dahab ah u sugnaado, ama cirka ka koro, ayan rumayneyn koriddiisa intuu waraaqo ay akhristaan uga keeno, Alle ayaa nasahan oo wayn, Nabigu ma waxaan dad Alle u waxyooday ahaynbaa. Aad bay isula wayn yihiin una madax adkaayeen, sharaftana xoolo, guryo, beero iyo biyo socda u moodeen, waxaase ka sarreeysa Nabinnimo, quraan, akhlaaq, caddaalad, Alle aqoonsi iyo liibaan aakhiro, hadday malaa'igi deggan tahay dhulka Alle wuxuu u soo diri lahaa malag rasuula, dadbaase deggan, marka waa in dad la mida loo soo diro, warka kalana layska dhaafo. **[Al-Israa': 90-95].**

96. Waxaad dhahdaa Alle ayaa ugu filan marag dhexdeenna, isaguna waa ogaha arka addoommadiisa.

قُلْ كَفَىٰ بِٱللَّهِ شَهِيدًۢا بَيْنِي وَبَيْنَكُمْ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ بِعِبَادِهِۦ خَبِيرًۢا بَصِيرًا ﴿٩٦﴾

97. Cidduu Alle hanuuniyo umbaa hanuunsan, cidduu dhumiyana uma helaysid ugargaare Alle

وَمَن يَهْدِ ٱللَّهُ فَهُوَ ٱلْمُهْتَدِ ۖ وَمَن يُضْلِلْ فَلَن تَجِدَ لَهُمْ أَوْلِيَآءَ مِن دُونِهِۦ ۖ

ka soo hadhay, waxaanna ku soo kulminaynaa qiyaamada wajigooda iyagoo indho la' oo hadal la' oo dhaga la', hooygooduna waa jahannamo, markastooy dantana waxaan u siyaadinnaa shidid (hurin).

وَنَحْشُرُهُمْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ عَلَىٰ وُجُوهِهِمْ عُمْيًا وَبُكْمًا وَصُمًّا ۖ مَّأْوَىٰهُمْ جَهَنَّمُ ۖ كُلَّمَا خَبَتْ زِدْنَٰهُمْ سَعِيرًا ﴿٩٧﴾

98. Taasina waa abaalkooda ah inay ka gaaloobeen aayaadkannaga, oy dheheen markaan lafo noqonno iyo burbur miyaa nala soo bixin abuur cusub.

ذَٰلِكَ جَزَآؤُهُم بِأَنَّهُمْ كَفَرُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا وَقَالُوٓا۟ أَءِذَا كُنَّا عِظَٰمًا وَرُفَٰتًا أَءِنَّا لَمَبْعُوثُونَ خَلْقًا جَدِيدًا ﴿٩٨﴾

99. Miyeyna ogayn Allaha abuuray samooyinka iyo dhulka inuu karo inuu abuuro wax la mida iyaga, una yeelo muddo aan shaki lahayn, wayse diideen daalimiintii gaalnimo mooyee (wax kale).

* أَوَلَمْ يَرَوْا۟ أَنَّ ٱللَّهَ ٱلَّذِى خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ قَادِرٌ عَلَىٰٓ أَن يَخْلُقَ مِثْلَهُمْ وَجَعَلَ لَهُمْ أَجَلًا لَّا رَيْبَ فِيهِ فَأَبَى ٱلظَّٰلِمُونَ إِلَّا كُفُورًا ﴿٩٩﴾

100. Waxaad dhahdaa idinku haddaad hanataan khasnadaha naxariista Rabbigay waad xajisan lahaydeen ka cabsi faqri, dadku waa bakhayl.

قُل لَّوْ أَنتُمْ تَمْلِكُونَ خَزَآئِنَ رَحْمَةِ رَبِّىٓ إِذًا لَّأَمْسَكْتُمْ خَشْيَةَ ٱلْإِنفَاقِ ۚ وَكَانَ ٱلْإِنسَٰنُ قَتُورًا ﴿١٠٠﴾

Alle ayaa marag ugu filan runnimada Nabiga, wuxuuna ogyahay oo arkaa addoommadiisa, cidduu hanuuniyo umbaa hanuunsan, tuu dhumiyana cid u gargaari ma jirto, waxaana loo soo kulmin kuwaas iyagoo wajigooda ku socda illeen Rabbiga lugahooda ku waday wuu karaa inuu ku wado wajigoodee, siduu Nabigu yidhi, waxayna imaan iyagoon wax arkayn, hadlaynna, waxna maqlayn, kuna hoyan jahannamo markay dantaba la sii hurin, waana abaalkooda illeen aayaadka Alle ayay ka gaaloobeene, waxayna diideen in Alle soo bixin intay lafo iyo burbur noqdeen waxayse illoobeen in Allaha abuuray cirka iyo dhulka uu karo in uu abuuro iyagoo kale qiyaamada, una yeelay muddo dhaba, gaalo iyo daalimiinse waxaan xumaan ku madax taag ahayn waa diideen, Alle ayaana hodana dadkuse waa fuqaro hadday khasnadaha naxariista Alle haystaanna way xajisan lahayeen iyagoo faqri ka yaabi illeen dad waa bakhayle. **[Al-Israa': 96-100].**

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا مُوسَىٰ تِسْعَ ءَايَـٰتٍۭ بَيِّنَـٰتٍ ۖ فَسْـَٔلْ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ إِذْ جَآءَهُمْ فَقَالَ لَهُۥ فِرْعَوْنُ إِنِّى لَأَظُنُّكَ يَـٰمُوسَىٰ مَسْحُورًا ﴿١٠١﴾

101. Waxaan dhab u siinnay (Nabi) Muuse sagaal aayadood (mucjiso) oo cad cad ee warso banii israa'iil markuu u yimid oo uu ku yidhi Fircoon waxaan kuu malayn Muusow mid la sixray.

قَالَ لَقَدْ عَلِمْتَ مَآ أَنزَلَ هَـٰٓؤُلَآءِ إِلَّا رَبُّ ٱلسَّمَـٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ بَصَآئِرَ ۖ وَإِنِّى لَأَظُنُّكَ يَـٰفِرْعَوْنُ مَثْبُورًا ﴿١٠٢﴾

102. Wuxuuna yidhi (Nabi Muuse) waad ogtahay inuusan soo dejinnin kuwaan waxaan Rabbiga samooyinka iyo dhulka ahayn iyagoo xujooyin ah, anna waxaan kuu malayn fircoonow mid la halaagi.

فَأَرَادَ أَن يَسْتَفِزَّهُم مِّنَ ٱلْأَرْضِ فَأَغْرَقْنَـٰهُ وَمَن مَّعَهُۥ جَمِيعًا ﴿١٠٣﴾

103. Markaasuu doonay Fircoon inuu ka kaxeeyo dhulka markaasaan maansheynay isagii iyo intii la jirtay dhammaan.

وَقُلْنَا مِنۢ بَعْدِهِۦ لِبَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ٱسْكُنُوا۟ ٱلْأَرْضَ فَإِذَا جَآءَ وَعْدُ ٱلْـَٔاخِرَةِ جِئْنَا بِكُمْ لَفِيفًا ﴿١٠٤﴾

104. Waxaana ku nidhi gadaashiis banii israa'iil daga dhulka, markuu yimaaddo yaboohii dambana waannu idin keeni dhammaan.

وَبِٱلْحَقِّ أَنزَلْنَـٰهُ وَبِٱلْحَقِّ نَزَلَ ۗ وَمَآ أَرْسَلْنَـٰكَ إِلَّا مُبَشِّرًا وَنَذِيرًا ﴿١٠٥﴾

105. Xaq baanna ku soo dejinnay quraanka xaqbuuna ku soo degay, waxaanna ku dirray adoo bishaareeye u diga ah.

وَقُرْءَانًا فَرَقْنَـٰهُ لِتَقْرَأَهُۥ عَلَى ٱلنَّاسِ عَلَىٰ مُكْثٍ وَنَزَّلْنَـٰهُ تَنزِيلًا ﴿١٠٦﴾

106. Waana quraan oon u kala bixinnay (soo dejintiisa) inaad ku akhrido dadka kaadsiinyo, waana soo dejinnay soo dejin qaar qaar ah.

Alle wuxuu siiyey lana soo bixiyey Nabi Muuse sagaal mucjiso, oo kala ah sida aayaddu sheegtay: ushii, gacantii, abaartii, baddii, maanshayntii, ayixii, koron korradii, rihii iyo dhiiggii ama nusqaantii midhaha, banii israa'iilla waa

ogyihiin, Fircoonse wuxuu ugu jawaabay inuu dhaho: Muusow waxaan kuu malayn in lagu sixray, wayna is maleeyeen Fircoon iyo Nabi Muuse, waxaase rumoobay malihii Nabi Muuse oo yidhi: waad ogtahay inuu aayadahan soo dejiyey Rabbiga cirka iyo dhulka isagoo xujooyin waano ah waxaana kuu malayn Fircoonow mid la halaagi, waana la halaagay markuu isku deyey inuu dhulka ka bixiyo oo la maansheeyey isagii iyo intii la jirtay, dhulkiina u hadheen oo dageen banii israa'iil inta yaboohii Alle ee soo uruurintooda laga gaadhi, quraanka Alle ayaa xaq ku soo dejiyey, xaq buuna ku soo degay Nabiguna waa bishaareeye diga, soo dejinta quraankuna hal mar ma ahayn ee wuxuu soo degayey saddex iyo labaatan sano; saddex iyo toban sano Maka ah iyo toban sanoo Madiina ah, si dadka loogu akhriyo kaadsiinyo iyo inyar inyar, waana xigmadda iyo naxariista Alle illeen hadduu hal mar soo dego siday gaaladu codsadeen waa lagu dhibboon lahaa. Waxaase loo baahan yahay raacidda quraanka, ku dhaqankiisa, barashadiisa, ugu yeedhiddiisa, si loo liibaano illeen waa xaqii Alleheenna wayn soo dejiyaye. **[Al-Israa': 101-106].**

قُلْ ءَامِنُوا۟ بِهِۦٓ أَوْ لَا تُؤْمِنُوٓا۟ ۚ إِنَّ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْعِلْمَ مِن قَبْلِهِۦٓ إِذَا يُتْلَىٰ عَلَيْهِمْ يَخِرُّونَ لِلْأَذْقَانِ سُجَّدًا ﴿١٠٧﴾

107. Waxaad dhahdaa rumeeya quraanka ama ha rumeynina kuwa la siiyey cilmiga (kuwa fiican) marka lagu akhriyo korkooda waxay u dhacaan wajiga iyagoo sujuudi.

وَيَقُولُونَ سُبْحَٰنَ رَبِّنَآ إِن كَانَ وَعْدُ رَبِّنَا لَمَفْعُولًا ﴿١٠٨﴾

108. Waxayna dhihi waxaa nasahan Rabbigeen ee yabooha Rabbigeen waa la fali (imaan).

وَيَخِرُّونَ لِلْأَذْقَانِ يَبْكُونَ وَيَزِيدُهُمْ خُشُوعًا ﴿١٠٩﴾

109. Waxayna u dhacaan wajiga iyagoo ooyi wuxuuna u kordhiyaa «quraanku» khushuuc.

قُلِ ٱدْعُوا۟ ٱللَّهَ أَوِ ٱدْعُوا۟ ٱلرَّحْمَٰنَ ۖ أَيًّا مَّا تَدْعُوا۟ فَلَهُ ٱلْأَسْمَآءُ ٱلْحُسْنَىٰ ۚ وَلَا تَجْهَرْ بِصَلَاتِكَ وَلَا تُخَافِتْ بِهَا وَٱبْتَغِ بَيْنَ ذَٰلِكَ سَبِيلًا ﴿١١٠﴾

110. Waxaad dhahdaa ama ku barya Allaah, ama ku barya Raxmaan wax kasta ood ku baridaan wuxuu leeyahay magacyo fiican, ee ha la qaylyin akhriskaaga (salaadda) hana qarsan ee doon jid u dhexeeya arrintaas «dhexdhexaad».

وَقُلِ ٱلۡحَمۡدُ لِلَّهِ ٱلَّذِي لَمۡ يَتَّخِذۡ وَلَدٗا
وَلَمۡ يَكُن لَّهُۥ شَرِيكٞ فِي ٱلۡمُلۡكِ
وَلَمۡ يَكُن لَّهُۥ وَلِيّٞ مِّنَ ٱلذُّلِّۖ وَكَبِّرۡهُ
تَكۡبِيرَۢا ﴿١١١﴾

111. Waxaadna dhahdaa mahad Alle ayaa iska leh een yeelannin ilmo, una sugnayn shariig (la wadaage) xukunkiisa, una sugnayn gargaare dulli dartiis (uga gargaare) ee waynee waynayn (sharrif).

Gaalase ama ha rumeeyeen quraanka ama ha beeniyeen, waxaana rumeeyey oo sujuud la dhacay markii lagu akhriyey kuwii fiicnaa ee cilmiga lahaa ee xaqa rumeeyey ee ehelu kitaabka ahaa, iyagoo waynayn Alle, rumayn yaboohiisa, ooyina iyagoo sujuudi oo khushuuci, gaaladiina waxay nici jireen magaca Alle ee Raxmaana markaasaa Alle u caddeeyey muslimiinta inay Alle ku baryi karaan magacyadiisa ama Alle ama Raxmaan illeen magacyo badan oo fiican yuu leeyahaye, wuxuuna Nabiga ku faray inuusan ku qaylyin oo kor u qaadin akhriska salaadda hoosna u dhigin ee si dhexdhexaada u akhriyo, kuna mahdiyo Allaha aan yeelannin ilmo, wax la wadaaga xukunkana jirin iyo uga gargaare dulli, una wayneeyo siduu muto, Alle ayaa wayn oo awood leh, wax la wayneeyana ah, wax cibaado, xukun, caddaalad, sharci, maamul, iyo wanaag la wadaaga ama u kaalmeeyana ma jiro, waxa ka soo hadhay dhammaan waa masaakiin tabar yar oo naxariista Alle hoos joogta, sugina. **[Al-Israa': 107-111].**

Suurat Al-Kahf

سُورَةُ الكَهۡفِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Mahad Alle ayaa iska leh ee ah kan ku soo dejiyey addoonkiisa (Nabi Muxamad ah) kitaabka (quraanka) oon yeelinna dhexdiisa qallooc.

ٱلۡحَمۡدُ لِلَّهِ ٱلَّذِيٓ أَنزَلَ عَلَىٰ عَبۡدِهِ ٱلۡكِتَٰبَ وَلَمۡ يَجۡعَل لَّهُۥ عِوَجَاۜ ١

2. Waana toosan yahay si uu ugaga digo ciqaab daran oo Alle xaggiisa ka ahaatay, uguna bishaareeyo mu'miniinta fala wanaagga inay muteen ajir fiican.

قَيِّمًا لِّيُنذِرَ بَأۡسٗا شَدِيدٗا مِّن لَّدُنۡهُ وَيُبَشِّرَ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ ٱلَّذِينَ يَعۡمَلُونَ ٱلصَّٰلِحَٰتِ أَنَّ لَهُمۡ أَجۡرًا حَسَنٗا ٢

3. Kuna nagaanayaan (jannada) waligood.

مَّٰكِثِينَ فِيهِ أَبَدٗا ٣

4. Ugana digo kuwa yidhi wuxuu yeeshey Alle ilmo.

وَيُنذِرَ ٱلَّذِينَ قَالُواْ ٱتَّخَذَ ٱللَّهُ وَلَدٗا ٤

5. Uma laha wax cilmi ah iyaga iyo aabbayaalkood midna, waxaana waynaatay kalimad ka soo baxday afafkooda, mana dhahayaan waxaan been ahayn.

مَّا لَهُم بِهِۦ مِنۡ عِلۡمٖ وَلَا لِأٓبَآئِهِمۡۚ كَبُرَتۡ كَلِمَةٗ تَخۡرُجُ مِنۡ أَفۡوَٰهِهِمۡۚ إِن يَقُولُونَ إِلَّا كَذِبٗا ٥

Suuraddu waxay soo degtay mar gaaladii qureesheed ee makaad u tageen qaarkood yuhuuddii Madiino warsadeenna xaalka Nabiga oy yuhuudna ku tidhi waydiiya saddex arrimood hadduu idiin sheegana waa Nabi xaq ah, waydiiya dhalinyaro mar hore jirtay xaalkoodii, nin wada maray adduunka bari iyo galbeed, iyo ruuxda. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa

ha yeelee) wuxuu yidhi: ruuxii xifdiya tobanka aayadood ee hore ee suuratul kahfi waxaa laga dhawraa Dajaal. Waxaa wariyey (Muslim).

Aayaduhuna waxay caddayn in mahad Alle muto, quraanka toosanna ku soo dejiyey Nabiga, si uu uguna digo, uguna bishaareeyo, gaaladuna wax cilmi ah uma leh xumaantay Alle ku sheegi ee waxay ku hadli been iyo waxaan jirin. **[Al-Kahf: 1-5].**

فَلَعَلَّكَ بَٰخِعٌ نَّفۡسَكَ عَلَىٰٓ ءَاثَٰرِهِمۡ إِن لَّمۡ يُؤۡمِنُواْ بِهَٰذَا ٱلۡحَدِيثِ أَسَفًا ٦

6. Waxaad u dhawdahay inaad ku (halaagto) naftaada Nabiyow raad kooda (gadaashooda) haddayna rumeyn quraankan, walbahaar dartiis.

إِنَّا جَعَلۡنَا مَا عَلَى ٱلۡأَرۡضِ زِينَةً لَّهَا لِنَبۡلُوَهُمۡ أَيُّهُمۡ أَحۡسَنُ عَمَلًا ٧

7. Waxaan ka yeellay waxa dhulka korkiisa ah quruxdiisa, si aan u imtixaanno midkooda fiican xagga camalka.

وَإِنَّا لَجَٰعِلُونَ مَا عَلَيۡهَا صَعِيدًا جُرُزًا ٨

8. Waxaanna ka yeelaynaa waxa korkeeda ah bannaan aan wax ka soo bixin.

أَمۡ حَسِبۡتَ أَنَّ أَصۡحَٰبَ ٱلۡكَهۡفِ وَٱلرَّقِيمِ كَانُواْ مِنۡ ءَايَٰتِنَا عَجَبًا ٩

9. Ma waxaad u malaysay Nabiyow godkii asaxaabtiisii (dadkiisii) iyo kitaabkii (iyo looxii) inay ugu yaab badan tahay aayaadkannaga.

إِذۡ أَوَى ٱلۡفِتۡيَةُ إِلَى ٱلۡكَهۡفِ فَقَالُواْ رَبَّنَآ ءَاتِنَا مِن لَّدُنكَ رَحۡمَةً وَهَيِّئۡ لَنَا مِنۡ أَمۡرِنَا رَشَدًا ١٠

10. Waa markay u dunmeen dhallinyaradu godka oy dhaheen Allow naga sii agtaada naxariis noona darab amarkannaga hanuun.

فَضَرَبۡنَا عَلَىٰٓ ءَاذَانِهِمۡ فِي ٱلۡكَهۡفِ سِنِينَ عَدَدًا ١١

11. Markaasaan ku sii daynay hurdo godka dhexdiisa sanooyin badan.

ثُمَّ بَعَثۡنَٰهُمۡ لِنَعۡلَمَ أَيُّ ٱلۡحِزۡبَيۡنِ أَحۡصَىٰ لِمَا لَبِثُوٓاْ أَمَدًا ١٢

12. Markaasaan soo bixinnay si aan u ogaanno labada xizbi midkooda koobid badan intay nagaadeen muddo.

Wuxuu Alle halkan ku calool adkaysiin kuna samirsiin Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) isagoo u tilmaami inuusan waxba walbahaar isugu badin hadday gaaladu rumeyn waayeen quraanka, illeen Alle imtixaan yuu u abuuray waxa dhulka korkiisa ahe, iyo in la eego kan camal-fiican, Alle ayaana halaagi waxa dhulka ku kor nool. Qisada asxaabul kahfina wax la yaab leh ma aha waxayse ahaayeen dhallinyaro hanuuntay oo Alle warsaday toosnaan markaas Alle seexiyey godka sanado badan, kadibna Alle soo bixiyey si aan u ogaanno cidda koobtay intay nagaadeen. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: adduunyadu waa macaan cagaaran, Alle na wuu idinku reebay isagoo fiirin waxaad camal fashaan ee ka dhawrsada adduunyo, kana dhawrsada ragoow haween, illeen fidmadii ugu horraysay banii israa'iil waxay ahayd haweene. Aayaduhuna waxay ku tusin iska dhawrka iyo diiddada xumaanta iyo in ciddii dar Alle u camal fasha uu Alle faraj u furi, guushana ku dambeysiin, iyo wanaagga adkaysiga iyo samarka. **[Al-Kahf: 6-12].**

13. Annagaa kaaga qisoon warkooda si xaq ah, waxay ahaayeen dhallinyaro rumeeyey Alle hood, waxaanna u siyaadinnay hanuun.

نَّحْنُ نَقُصُّ عَلَيْكَ نَبَأَهُم بِٱلْحَقِّ ۚ إِنَّهُمْ فِتْيَةٌ ءَامَنُوا۟ بِرَبِّهِمْ وَزِدْنَٰهُمْ هُدًى ﴿١٣﴾

14. Waxaan xoojinnay (oon adkaynay) quluubtooda, oyna dhaheen Alleheen waa Alleha samaawaadka iyo dhulka, baryinamayno (caabudimayno) Ilaah ka soo hadhay, waxaan ku hadalnay markaas hadal xun (oo baadil ah).

وَرَبَطْنَا عَلَىٰ قُلُوبِهِمْ إِذْ قَامُوا۟ فَقَالُوا۟ رَبُّنَا رَبُّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ لَن نَّدْعُوَا۟ مِن دُونِهِۦٓ إِلَٰهًا ۖ لَّقَدْ قُلْنَآ إِذًا شَطَطًا ﴿١٤﴾

15. Kuwaasu waa qoomkannagii waxay yeesheen Alle ka sokow ilaahyo, mey u keenaan korkooda wax xujo cad ah, yaase ka dulmi badan ruux ku abuurtay Alle dushiisa been.

هَٰٓؤُلَآءِ قَوْمُنَا ٱتَّخَذُوا۟ مِن دُونِهِۦٓ ءَالِهَةً ۖ لَّوْلَا يَأْتُونَ عَلَيْهِم بِسُلْطَٰنٍۭ بَيِّنٍ ۖ فَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنِ ٱفْتَرَىٰ عَلَى ٱللَّهِ كَذِبًا ﴿١٥﴾

16. Markaad ka fogaataan gaalada iyo waxay caabudi oo Alle ka soo hadhay u dunma godka wuxuu idiin fidin

وَإِذِ ٱعْتَزَلْتُمُوهُمْ وَمَا يَعْبُدُونَ إِلَّا ٱللَّهَ فَأْوُۥٓا۟ إِلَى ٱلْكَهْفِ يَنشُرْ لَكُمْ رَبُّكُم

مِّن رَّحۡمَتِهِۦ وَيُهَيِّئۡ لَكُم مِّنۡ أَمۡرِكُم مِّرۡفَقًا ﴿١٦﴾

Allihiin naxariise idinkana darbi amarkiinna waxaad ku istareexdaan kuna kala saartaan xumaanta iyo wanaagga.

Aayadahan waxay sharxi qisada asxaabul kahfi, lbnu Kathiir wuxuu yidhi: Alle wuxuu sheegay inay dhallinyaro ahaayeen, iyagaana xaqa ka aqbali og kagagana hanuuni og jidka odayada ku madaxtaagay kuna dabaashay baadilka, saas darteed yey kuwii u badnaa ee ajiibay Alle iyo Rasuulkiisa ahaayeen dhallinyaro, odayadii qureesheedse intoodii badnayd waxay ku hadheen diintoodii. Alle na wuxuu sheegay inay ahaayeen dhallinyaro rumeysan xaqa, qalbigoodana Alle xaqa ku sugay, Ilaah mooyee aan wax kalena u jeedsan, kana leexday jidkii xumaa ee qoomkoodii, dar Alle na u tegay godkana u aaday, Alle na xoojiyey waafajiyeyna wanaagga. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: waxay u dhawdahay inay noqoto xoolo kan ugu khayr roon adhi uu ku raaco buuraha iyo roobka isagoo kala carari diintiisa fidmada. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Abuu Daawuud. **[Al-Kahf: 13-16].**

* وَتَرَى ٱلشَّمۡسَ إِذَا طَلَعَت تَّزَٰوَرُ عَن كَهۡفِهِمۡ ذَاتَ ٱلۡيَمِينِ وَإِذَا غَرَبَت تَّقۡرِضُهُمۡ ذَاتَ ٱلشِّمَالِ وَهُمۡ فِي فَجۡوَةٖ مِّنۡهُۚ ذَٰلِكَ مِنۡ ءَايَٰتِ ٱللَّهِۗ مَن يَهۡدِ ٱللَّهُ فَهُوَ ٱلۡمُهۡتَدِۖ وَمَن يُضۡلِلۡ فَلَن تَجِدَ لَهُۥ وَلِيّٗا مُّرۡشِدٗا ﴿١٧﴾

17. Waxaad arkaysaa qorraxda oo markay dhalato uga iilan godkooda xagga midig, markay dhicina ka gooyn xagga bidix iyagoo ku sugan meel waasac ah oo godka, taasina waxay ka mid tahay aayaadka Alle, ruuxuu hanuuniyo Alle unbaa hanuunsan, ruuxuu dhumiyana u heli maysid gargaare hanuuniya.

وَتَحۡسَبُهُمۡ أَيۡقَاظٗا وَهُمۡ رُقُودٞۚ وَنُقَلِّبُهُمۡ ذَاتَ ٱلۡيَمِينِ وَذَاتَ ٱلشِّمَالِۖ وَكَلۡبُهُم بَٰسِطٞ ذِرَاعَيۡهِ بِٱلۡوَصِيدِۚ لَوِ ٱطَّلَعۡتَ عَلَيۡهِمۡ لَوَلَّيۡتَ مِنۡهُمۡ فِرَارٗا وَلَمُلِئۡتَ مِنۡهُمۡ رُعۡبٗا ﴿١٨﴾

18. Waxaad u malayn inay soo jeedaan iyagoo jiifa, waxaanna u gagadin midig iyo bidix, eygoodiina wuxuu ku fidin dhudhummadiisa albaabka, haddaad aragto waad ka jeedsan lahayd, adoo carari waxaana lagaa buuxin lahaa xaggooda argagax.

وَكَذَٰلِكَ بَعَثْنَٰهُمْ لِيَتَسَآءَلُوا۟ بَيْنَهُمْ ۚ قَالَ قَآئِلٌ مِّنْهُمْ كَمْ لَبِثْتُمْ ۖ قَالُوا۟ لَبِثْنَا يَوْمًا أَوْ بَعْضَ يَوْمٍ ۚ قَالُوا۟ رَبُّكُمْ أَعْلَمُ بِمَا لَبِثْتُمْ فَٱبْعَثُوٓا۟ أَحَدَكُم بِوَرِقِكُمْ هَٰذِهِۦٓ إِلَى ٱلْمَدِينَةِ فَلْيَنظُرْ أَيُّهَآ أَزْكَىٰ طَعَامًا فَلْيَأْتِكُم بِرِزْقٍ مِّنْهُ وَلْيَتَلَطَّفْ وَلَا يُشْعِرَنَّ بِكُمْ أَحَدًا ﴿١٩﴾

19. Saasaanna u soo bixinnay inay is warsadaan dhexdooda, wuxuu yidhi mid ka mid ah imisaad nagaateen, waxay dhaheen waxaan nagaannay maalin ama maalin qaarkeed, waxay dhaheen Alleheen baa og waxaad nagaateen ee la dira midkiin lacagtan xagga magaalada, hana soo fiiriyo cidda ugu cunno xalaalsan, hana idiinka keeno rizqi hana isqariyo (oo istartiibiyo) yuuna idin ogeeysiin xaggooda ruuxna.

إِنَّهُمْ إِن يَظْهَرُوا۟ عَلَيْكُمْ يَرْجُمُوكُمْ أَوْ يُعِيدُوكُمْ فِى مِلَّتِهِمْ وَلَن تُفْلِحُوٓا۟ إِذًا أَبَدًا ﴿٢٠﴾

20. Iyagu hadday idin arkaan way idin dhagaxyeyn, ama idinku celin diintooda mana liibaanaysaan markaas waligiin.

Naxariista Alle darteed waxay ahaayeen kuwo laga dhawray kulaylka qorraxda oy ka maraysay dhinaca dhalasho iyo dhinaca dhicidda, arrintaasna waa aayaadka Alle, waxaana hanuuni ruuxii Alle waafajiyo, kii kalana ma helo hanuuniye Alle ka soo hadhay, qudrada Alle way soo jeedeen iyagoo la moodo inay hurdaan, waxay u gagadoomayeen midig iyo bidix, eygoodina irridduu jeenyaha ku fidiyey, ciddii aragtana way cabsan lahayd oo carari lahayd, markaasaa Alle soo bixiyey iyagoo is warsan intay noolaayeen oyna mid ka mid ah magaalada u direen isagoo lacag wata si uu cunno xalaal ah u soo gado isagoo is qarin, illeen waxay ka yaabi in gaaladay ka carareen joogaan oo dilaan ama xoog diintooda ku galiyaan oy khasaaraan. Taasina waxay ku tusin naxariista Alle iyo awooddiisa iyo inuu falo wuxuu doono. **[Al-Kahf: 17-20].**

وَكَذَٰلِكَ أَعْثَرْنَا عَلَيْهِمْ لِيَعْلَمُوٓا۟ أَنَّ وَعْدَ ٱللَّهِ حَقٌّ وَأَنَّ ٱلسَّاعَةَ لَا رَيْبَ فِيهَآ إِذْ يَتَنَٰزَعُونَ بَيْنَهُمْ أَمْرَهُمْ ۖ فَقَالُوا۟ ٱبْنُوا۟ عَلَيْهِم بُنْيَٰنًا ۖ رَّبُّهُمْ أَعْلَمُ بِهِمْ ۚ قَالَ ٱلَّذِينَ غَلَبُوا۟ عَلَىٰٓ أَمْرِهِمْ لَنَتَّخِذَنَّ عَلَيْهِم مَّسْجِدًا ﴿٢١﴾

21. Saasaan u daalacsiinnay (u tusinnay) dadka si ay u ogaadaan in yabooha Alle xaq yahay, saacadda (qiyaamana) aan shaki ku jirin (waxaan tusinnay) markay ku murmeen dhexdooda amarkooda, oy (isku) dhaheen ka dhisa korkooda, dhismo,

Rabbigood baa og iyagee, waxay dhaheen kuwii ku reeyey amarkooda aan ka yeelanno korkooda masaajid.

22. Waxay dhihi waxay ahaayeen saddex waxaana afreeyey eygoodii, waxay dhihi waxay ahaayeen shan waxaana lixeeyey eygoodii iyagoo iska gani wax maqan (iska dhihi cilmi la'aan) waxay dhihi waxay ahaayeen todobo waxaana siddeedeeyey eygoodii, waxaad dhahdaa Rabbigey baa og tiradooda, mana oga tiradooda dad yar mooyee, ee ha kula murmin xaalkooda muran muuqda oo fudud mooyee, hana waydiin xaggooda ruuxna.

سَيَقُولُونَ ثَلَٰثَةٌ رَّابِعُهُمْ كَلْبُهُمْ وَيَقُولُونَ
خَمْسَةٌ سَادِسُهُمْ كَلْبُهُمْ رَجْمًۢا بِٱلْغَيْبِ ۖ
وَيَقُولُونَ سَبْعَةٌ وَثَامِنُهُمْ كَلْبُهُمْ ۚ قُل رَّبِّىٓ
أَعْلَمُ بِعِدَّتِهِم مَّا يَعْلَمُهُمْ إِلَّا قَلِيلٌ ۬ فَلَا
تُمَارِ فِيهِمْ إِلَّا مِرَآءً ظَٰهِرًا وَلَا تَسْتَفْتِ
فِيهِم مِّنْهُمْ أَحَدًا ﴿٢٢﴾

Waxay keentay xigmadda Alle in la arko dhallinyaradaa si loo ogaado in yabooha Alle xaq yahay, qiyaamadana aan shaki ku jirin, markay arkeen oy ka dibna dhinteen yey ku murmeen in ay ardaagooda wax ku dhisaan, waxayna yiraahdeen kuwii reeyey masaajid ha lagu dhiso (in qubuurta masaajid laga dul dhiso, waa xaaraan, axaadiithti Rasuulkuna waa ay ku tawaaturtay iska reebiddeeda, iyo lacnadda qofkii sameeya). Tan kale waxaa lagu murmay tiradooda intay ahayd, cid ogna ma jirto Alle mooyee. Taasooy kuwo dhaheen waxay ahaayeen seddex iyo eygoodii, kuwana shan iyo eygoodii, kuwana todoba iyo eygoodii, Alle ayaase og intay ahaayeen, cid ogna ma jirto wax yar mooyee, in lagu murmana ma habboona si fudud oo wax is tus ah mooyee, cid ehelu kitaabka ahna waxba lagama warsado.

Qisadana waxaa loo baahan yahay ruuxii mu'min ah inuu si fiican u rumeeyo una hoggaansamo, illeen Alle wax walba wuu karaaye marba hadduu Alle abuuray cirka, dhulka iyo khalqiga kalaba awooddiisu xad ma leh, wuxuu doonana wuu falaa, kuwa shakin arrimahan oo kalana waa kuwo caqli yar oo wax walba ku eegi muraayadahooda aragga gaaban ama aragga xumaysa. Tan kale waxay ku tusin in xaqa iyo ehelkiisu hadho xumaanta iyo ehelkeeduna tago. **[Al-Kahf: 21-22].**

وَلَا تَقُولَنَّ لِشَاْىْءٍ إِنِّى فَاعِلٌ ذَٰلِكَ غَدًا ﴿٢٣﴾

23. Ha dhihin arrin aad go'aamisay dartiis kaas ayaan sameyn berri (waqtiga soo socda).

إِلَّآ أَن يَشَآءَ ٱللَّهُ ۚ وَٱذْكُر رَّبَّكَ إِذَا نَسِيتَ وَقُلْ عَسَىٰٓ أَن يَهْدِيَنِ رَبِّى لِأَقْرَبَ مِنْ هَٰذَا رَشَدًا ﴿٢٤﴾

24. (Adoon dhihin) hadduu doono Alle, xusna Allehaa haddaad halmaanto, waxaadna dhahdaa wuxuu u dhaw yahay inuu igu hanuuniyo Rabbigey wax ka dhaw kaas oo toosni ah.

وَلَبِثُوا۟ فِى كَهْفِهِمْ ثَلَٰثَ مِا۟ئَةٍ سِنِينَ وَٱزْدَادُوا۟ تِسْعًا ﴿٢٥﴾

25. Waxay ku nagaadeen godkoodii seddex boqol oo sano waxayna siyaadsadeen sagaal.

قُلِ ٱللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا لَبِثُوا۟ ۖ لَهُۥ غَيْبُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۖ أَبْصِرْ بِهِۦ وَأَسْمِعْ ۚ مَا لَهُم مِّن دُونِهِۦ مِن وَلِىٍّ وَلَا يُشْرِكُ فِى حُكْمِهِۦٓ أَحَدًا ﴿٢٦﴾

26. Waxaad dhahdaa Alle ayaa og waxay nagaadeen, waxaa u sugnaaday waxa ku maqan samooyinka iyo dhulka, arki ogaa oo maqli ogaa Alle, umana sugnaanin dadka isaga ka sokow gargaare, lamana wadaajiyo xukunkiisa cidna.

Alle wuxuu ku hanuuniyey Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) aadaab fiican oo ah inuusan dhihin waxaasaan fali isagoon raacinnin: hadduu Alle doono, mu'miniintana saasaa laga rabaa, waana in had iyo jeer la xusaa Alle si halmaanshaha shaydaanka looga fogaado, hanuunkana Alle la warsadaa. Dhallinyaradii asxaabul kahfina intay ku nagaadeen godka Alle ayaa og waana muddadaas Alle sheegay, illeen Alle ayaa og waxa maqan arkana maqlana, dadkana wax gargaare ah oo Alle ka soo hadhay ama xukunka la wadaaga ma jiraan. Alle na isagaa sayid awood leh ah, xukun, dil, dayn, irzaaqid, naxariis, xoog iyo tasarruf dhamaantiisna isagaa iska leh, wax kula wadaaga cirka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeyana ma jiro, saas darteed waa in dhab ahaan loo caabudo, loona hoggaansamo, sharcigiisana lagu dhaqmo, xagga xukunka, mucaamalada, akhlaaqda iyo nolosha dhammaanteedba, **[Al-Kahf: 23-26].**

وَٱتْلُ مَآ أُوحِىَ إِلَيْكَ مِن كِتَابِ رَبِّكَ ۖ لَا مُبَدِّلَ لِكَلِمَٰتِهِۦ وَلَن تَجِدَ مِن دُونِهِۦ مُلْتَحَدًا ﴿٢٧﴾

27. Akhri (oo raac) waxa laguu waxyooday oo kitaabka Allehaa ah, wax baddali kalimooyinkiisana ma jiro, mana

helaysid wax ka sokeeya ood magangashid.

28. Ee ku samirsii naftaada la jirka kuwa baryaya Rabbigood aroor iyo galabba, iyagoo dooni wajigiisa, yeyna ka iilannin indhahaagu xaggooda adoo dooni quruxda nolosha dhaw (ee adduun) hana adeecin ruuxaan halmaansiinnay qalbigiisa xusiddannada oo raacay hawadiisa uuna ahaaday amarkiisu xadgudub (iyo xumaan).

وَٱصۡبِرۡ نَفۡسَكَ مَعَ ٱلَّذِينَ يَدۡعُونَ رَبَّهُم بِٱلۡغَدَوٰةِ وَٱلۡعَشِيِّ يُرِيدُونَ وَجۡهَهُۥۖ وَلَا تَعۡدُ عَيۡنَاكَ عَنۡهُمۡ تُرِيدُ زِينَةَ ٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَاۖ وَلَا تُطِعۡ مَنۡ أَغۡفَلۡنَا قَلۡبَهُۥ عَن ذِكۡرِنَا وَٱتَّبَعَ هَوَىٰهُ وَكَانَ أَمۡرُهُۥ فُرُطٗا ٢٨

29. Waxaad dhahdaa xaqu Allihiin buu ka ahaaday ee ciddii doonta ha gaalowdo, annagu waxaan u darabnay daalimiinta naar oy koobtay iyaga (barxaddeedu) iyo darbigeedu, hadday kaalmo warsadaanna waxaa loogu kaalmeeyaa biyo daammur oo kale ah oo duba wajiyada, cabitaankoodaa xumaaday, u xun cabbid, iyadaana u xun meel lagu dangiigsado.

وَقُلِ ٱلۡحَقُّ مِن رَّبِّكُمۡۖ فَمَن شَآءَ فَلۡيُؤۡمِن وَمَن شَآءَ فَلۡيَكۡفُرۡۚ إِنَّآ أَعۡتَدۡنَا لِلظَّٰلِمِينَ نَارًا أَحَاطَ بِهِمۡ سُرَادِقُهَاۚ وَإِن يَسۡتَغِيثُواْ يُغَاثُواْ بِمَآءٖ كَٱلۡمُهۡلِ يَشۡوِي ٱلۡوُجُوهَۚ بِئۡسَ ٱلشَّرَابُ وَسَآءَتۡ مُرۡتَفَقٗا ٢٩

Alle wuxuu faray Nabigiisa inuu akhriyo kitaabka quraanka ah dadkana gaadhsiiyo wax badali karana ma jiro, meel la magan galoo Alle ka soo hadhayna ma jiro. Waxaa kaloo Alle faray Nabiga inuu la noolaado mu'miniinta baryi Rabbigood had iyo jeer kana iilannin indhihiisu isagoo dooni nolosha adduunyo, uusan maqlin kuwa qalbigooda la halmaansiiyey xuska Alle oo hawadooda xun raacay xadna gudbay, xaquna waa cad yahay ee ciddii doonta ha raacdo tii doontana ha gaalowdo, waxaa uun gaalo loo darbay cadaab oo gubee, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: qoomkii kulma iyagoo xusi Alle oo wajigiisa dooni waxaa looga dhawaaqaa cirka: kaca waa laydiin dambi dhaafaye wuxuuna ku baddalay xumaantiinna wanaaage.(Imaam Axmed). **[Al-Kahf: 27-29].**

30. Kuwa rumeeyey (xaqa) oo camal fiican falay annagu ma hallayno ajarka ciddii wanaajisa camalka.

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ إِنَّا لَا نُضِيعُ أَجۡرَ مَنۡ أَحۡسَنَ عَمَلًا ﴿٣٠﴾

31. Kuwaas waxay mudan jannada cadnin oo dureeri dhexdeeda wabiyaal, looguna labisi dhexdeeda jijimo dahab ah, una xidhay maryo cagaaran oo ah xariir jilicsan iyo mid adagba, waxayna ku dangiigsan dhexdeeda sariiro korkood, waa abaal marin fiican una wanaagsan meel lagu (istareexo) laguna nasto.

أُوْلَٰٓئِكَ لَهُمۡ جَنَّٰتُ عَدۡنٖ تَجۡرِي مِن تَحۡتِهِمُ ٱلۡأَنۡهَٰرُ يُحَلَّوۡنَ فِيهَا مِنۡ أَسَاوِرَ مِن ذَهَبٖ وَيَلۡبَسُونَ ثِيَابًا خُضۡرٗا مِّن سُندُسٖ وَإِسۡتَبۡرَقٖ مُّتَّكِـِٔينَ فِيهَا عَلَى ٱلۡأَرَآئِكِۚ نِعۡمَ ٱلثَّوَابُ وَحَسُنَتۡ مُرۡتَفَقٗا ﴿٣١﴾

32. Uga yeel tusaale labo nin oon u yeellay midkood laba beerood oo cinab ah, kuna wareejinnay geed timireed yeellayna dhexdooda abuur.

* وَٱضۡرِبۡ لَهُم مَّثَلٗا رَّجُلَيۡنِ جَعَلۡنَا لِأَحَدِهِمَا جَنَّتَيۡنِ مِنۡ أَعۡنَٰبٖ وَحَفَفۡنَٰهُمَا بِنَخۡلٖ وَجَعَلۡنَا بَيۡنَهُمَا زَرۡعٗا ﴿٣٢﴾

33. Labada beeroodba mid kasta ay bixisay miraheedii, oo aysanna waxba ka nusqaamin, waxaanan ka dhambalnay dhexdooda wabi.

كِلۡتَا ٱلۡجَنَّتَيۡنِ ءَاتَتۡ أُكُلَهَا وَلَمۡ تَظۡلِم مِّنۡهُ شَيۡـٔٗاۚ وَفَجَّرۡنَا خِلَٰلَهُمَا نَهَرٗا ﴿٣٣﴾

34. Midhana uu leeyahay oo markaas ku yidhi saaxiibkiis asagoo hadalka ku celcelin anaa kaa xoolo badan kaana tol badan.

وَكَانَ لَهُۥ ثَمَرٞ فَقَالَ لِصَٰحِبِهِۦ وَهُوَ يُحَاوِرُهُۥٓ أَنَا۠ أَكۡثَرُ مِنكَ مَالٗا وَأَعَزُّ نَفَرٗا ﴿٣٤﴾

35. Wuxuu galay beertiisii isagoo dulmiyey naftiisa, wuxuu yidhi uma malaynayo inay halaagsami waligeed.

وَدَخَلَ جَنَّتَهُۥ وَهُوَ ظَالِمٞ لِّنَفۡسِهِۦ قَالَ مَآ أَظُنُّ أَن تَبِيدَ هَٰذِهِۦٓ أَبَدٗا ﴿٣٥﴾

وَمَآ أَظُنُّ ٱلسَّاعَةَ قَآئِمَةً وَلَئِن رُّدِدتُّ إِلَىٰ رَبِّى لَأَجِدَنَّ خَيْرًا مِّنْهَا مُنقَلَبًا ﴿٣٦﴾

36. Umana malaynayo in saacadda (qiyaame) kici, haddii lay celiyo xagga Rabbigeyna waxaan ka heli mid ka khayr roon noqoshada.

Kuwa xaqa rumeeyey oo wanaagga falay waxaa fiican ee Alle u darbay wax badan yuu quraanku ka warramay, halkan arrintaas yaa ku cad. Aayadaha kale waxay ka qisoon laba nin oo midkood beera badnaa uguna faanay saaxiibkiis inuu ka xoolo iyo dad badan yahay isagooy yaab galisay beertiisu, iyo waxa ka baxay oo midha ah iyo waxa dhex socda oo biyo ah. Intuu ka inkiro oo ka gaaloobo dhicidda qiyaamada. Mana habboona in nicmada Alle la qaabiliyo diiddo, gaalnimo, faan iyo kibir ee waa in Alle lagu aqoonsado laguna mahdiyo looguna kaalmaysto cibaadada Alle. Qataade wuxuu yidhi: taasi wallee waa yididiilada faajirka, xoolo badni iyo qaraabo xoogle. **[Al-Kahf: 30-36].**

قَالَ لَهُۥ صَاحِبُهُۥ وَهُوَ يُحَاوِرُهُۥٓ أَكَفَرْتَ بِٱلَّذِى خَلَقَكَ مِن تُرَابٍ ثُمَّ مِن نُّطْفَةٍ ثُمَّ سَوَّىٰكَ رَجُلًا ﴿٣٧﴾

37. Wuxuu yidhi saaxiibkiisii isagoo la hadli ma waxaad ka gaaloowday Allihii kaa abuuray carro, hadana dhibic, markaas ku ekeeyey adoo nin ah.

لَّٰكِنَّا۠ هُوَ ٱللَّهُ رَبِّى وَلَآ أُشْرِكُ بِرَبِّىٓ أَحَدًا ﴿٣٨﴾

38. Hasa yeeshee Ilaahay waa Rabbigey lana wadaajin maayo (cibaadada) Rabbigey cidna.

وَلَوْلَآ إِذْ دَخَلْتَ جَنَّتَكَ قُلْتَ مَا شَآءَ ٱللَّهُ لَا قُوَّةَ إِلَّا بِٱللَّهِ ۚ إِن تَرَنِ أَنَا۠ أَقَلَّ مِنكَ مَالًا وَوَلَدًا ﴿٣٩﴾

39. Maxaadan markaad gasho beertaada u dhihin wuxuu Allaah doono wuu ahaadaa, xoogna uma lihin daacadda Alle hadduusan awood noo siin. Haddaad aragtay anoo kaa yar adiga xoolo iyo carruurba.

فَعَسَىٰ رَبِّىٓ أَن يُؤْتِيَنِ خَيْرًا مِّن جَنَّتِكَ وَيُرْسِلَ عَلَيْهَا حُسْبَانًا مِّنَ ٱلسَّمَآءِ فَتُصْبِحَ صَعِيدًا زَلَقًا ﴿٤٠﴾

40. Wuxuu u dhaw yahay Allehay inuu i siiyo wax ka khayr badan beertaada, kuna diro korkeeda aafo samo, oy markaas ahaato bannaan lagu simbiririxoodo.

أَوْ يُصْبِحَ مَآؤُهَا غَوْرًا فَلَن تَسْتَطِيعَ لَهُۥ طَلَبًا ﴿٤١﴾

41. Ama ahaadaan biyaheedu kuwa gudha oodan karin doonid (soo celin).

42. Waa la koobay midhihiisii (la halaagay) oo ahaaday kii gaddin gacmihiisa, shallaay wuxuu ku bixiyey, iyadoo ku dhacday darbiyadeeda, isagoo leh shalleytee maanan la wadaajiyeenaa Rabbigey cidna.

وَأُحِيطَ بِثَمَرِهِۦ فَأَصْبَحَ يُقَلِّبُ كَفَّيْهِ عَلَىٰ مَآ أَنفَقَ فِيهَا وَهِىَ خَاوِيَةٌ عَلَىٰ عُرُوشِهَا وَيَقُولُ يَٰلَيْتَنِى لَمْ أُشْرِكْ بِرَبِّىٓ أَحَدًا ﴿٤٢﴾

43. Uma ahaannin koox u gargaarta oo ka soo hadhay Alle mana aha mid gargaarta.

وَلَمْ تَكُن لَّهُۥ فِئَةٌ يَنصُرُونَهُۥ مِن دُونِ ٱللَّهِ وَمَا كَانَ مُنتَصِرًا ﴿٤٣﴾

44. Halkaas (qiyaamada) yey awooddu u ahaan Allaha xaqa ah, isagaana khayr roon abaal marin khayr roonna cidhib.

هُنَالِكَ ٱلْوَلَٰيَةُ لِلَّهِ ٱلْحَقِّ ۚ هُوَ خَيْرٌ ثَوَابًا وَخَيْرٌ عُقْبًا ﴿٤٤﴾

Saasay kala yihiin muslim iyo gaal, waxaa inoo soo hormaray warkii gaalka iyo waxuu ku abaal mariyey nicmada Alle, mu'minkiina waa kan xusuustay sida Alle u abuuray ninna uga dhigay, iyo inayna haboonayn in cibaadada wax lala wadaajiyo, iyo Alle lagu mahdiyo nicmadiisa awoodana loo qiro, oon laguna faanin xoolo iyo carruur, illeen Alle ayaa halaagi kara oo tirtiri karee, waxaana lagu abaal mariyey gaalkii faanayey in la halaagay beertiisii oo uu shallaytooday wuxuu ku bixiyey, uuna qoomammooday waqti ayna waxtarayn qoomamo, wax u gargaarana uusan jirin, isna gargaaran karin, xukunka iyo awoodana Allaha xaqa ah yaa leh, maalinta qiyaame. Rasuulku (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Abuu Hureyrow ma ku tusiyaa kansi ka mid ah kansiyada jannada markaasuu yidhi: haa, aabahay iyo hooyaday ha lagugu furtee, markaasuu yidhi: waa inaad dhahdo: xoog uma lihi daacada Alle, hadduusan awood ii siin, wuxuuna dhihi Alle: wuu islaamay addoonkaygii wuuna hoggaansamay. Waxaa wariyey (Imaam Axmed). **[Al-Kahf: 37-44]**

45. Uga yeel Nabiyow tusaale nolosha adduunyo biyo oo kale oon ka soo dejinnay samada oo isku darsamay waxa ka soo baxay dhulka oo markaas noqday ingayg kala firdhiso dabayluhu, wuxuuna ahaaday Alle kii wax kasta kara.

وَٱضْرِبْ لَهُم مَّثَلَ ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا كَمَآءٍ أَنزَلْنَٰهُ مِنَ ٱلسَّمَآءِ فَٱخْتَلَطَ بِهِۦ نَبَاتُ ٱلْأَرْضِ فَأَصْبَحَ هَشِيمًا تَذْرُوهُ ٱلرِّيَٰحُ ۗ وَكَانَ ٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ مُّقْتَدِرًا ﴿٤٥﴾

ٱلْمَالُ وَٱلْبَنُونَ زِينَةُ ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا ۖ وَٱلْبَٰقِيَٰتُ ٱلصَّٰلِحَٰتُ خَيْرٌ عِندَ رَبِّكَ ثَوَابًا وَخَيْرٌ أَمَلًا ﴿٤٦﴾

46. Xoolaha iyo wiilashu (carruurtu) waa quruxda nolosha adduunyo, kuwa hadha ee wanaagsan yaa ku khayr roon Allehaa agtiisa abaalmarin una khayr roon yididiilo (camalka fiican).

وَيَوْمَ نُسَيِّرُ ٱلْجِبَالَ وَتَرَى ٱلْأَرْضَ بَارِزَةً وَحَشَرْنَٰهُمْ فَلَمْ نُغَادِرْ مِنْهُمْ أَحَدًا ﴿٤٧﴾

47. Xus maalinta aannu kaxayn buuraha ood arkayso dhulka oo muuqda, oon soo kulminnay dadkii oonnan ka tagin cidna.

وَعُرِضُوا۟ عَلَىٰ رَبِّكَ صَفًّا لَّقَدْ جِئْتُمُونَا كَمَا خَلَقْنَٰكُمْ أَوَّلَ مَرَّةٍۭ ۚ بَلْ زَعَمْتُمْ أَلَّن نَّجْعَلَ لَكُم مَّوْعِدًا ﴿٤٨﴾

48. Waxaana loo bandhigi dadkii Allehaa iyagoo saf ah, dhab ahaan yaad noogu timaadaan saan idiin abuurnay markii horaba (yaa lagu dhihi kuwa inkiray soo nooleynta), waxaadse sheegateen inaannaan idiin yeelayn ballan «la idinku soo saarayo aakhiro».

وَوُضِعَ ٱلْكِتَٰبُ فَتَرَى ٱلْمُجْرِمِينَ مُشْفِقِينَ مِمَّا فِيهِ وَيَقُولُونَ يَٰوَيْلَتَنَا مَالِ هَٰذَا ٱلْكِتَٰبِ لَا يُغَادِرُ صَغِيرَةً وَلَا كَبِيرَةً إِلَّآ أَحْصَىٰهَا ۚ وَوَجَدُوا۟ مَا عَمِلُوا۟ حَاضِرًا ۗ وَلَا يَظْلِمُ رَبُّكَ أَحَدًا ﴿٤٩﴾

49. Waxaana la dejin (keeni) kitaabkii (camalka) waxaadna arkaysaa dambiilayaashii oo ka cabsan waxa ku sugan oo dhihi hallaaggannee muxuu leeyahay kitaabkan oosan uga tagayn wax yar iyo wax wayn ee uu koobay wayna heli waxay camal faleen oo jooga, mana dulmiyo Allehaa cidna.

Aayado badan yaa ka warramay adduunyada iyo say ku dambeyn iyo inay habboon tahay inaan lagu kadsoomin xoolo iyo carruurna waxba kama taraan Alle agtiisa, ee waxaa wax tara camalka fiican ee hadhi, maalinta qiyaame ee buuraha la kaxayn dhulkuna bannaan noqon ee dadka la soo kulmin cidna lagama tagayo, dadkuna way imaan iyagoo safan sidii Alle ugu abuuray oo kale, inkastooy gaaladu diideen, waxaadna arki maalintaas dambiilayaasha oo cabsan oo calaacali iyagoo sheegi inuusan kitaabka camalka lagu qoro wax yar iyo wax wayn midna ka tagayn, cid walbana heli waxay camal fashay oo jooga, isagoon Alle cidna dulmayn. Waxaana sugnaatay in Alle soo kulmin

dadka qiyaamada una dhawaaqi iyagoo wada maqli laysuna qisaasi xataa dharbaaxada, waxaana loo kala qaadi khayrka iyo sharka. **[Al-Kahf: 45-49].**

وَإِذْ قُلْنَا لِلْمَلَٰٓئِكَةِ ٱسْجُدُوا۟ لِـَٔادَمَ فَسَجَدُوٓا۟ إِلَّآ إِبْلِيسَ كَانَ مِنَ ٱلْجِنِّ فَفَسَقَ عَنْ أَمْرِ رَبِّهِۦٓ ۗ أَفَتَتَّخِذُونَهُۥ وَذُرِّيَّتَهُۥٓ أَوْلِيَآءَ مِن دُونِى وَهُمْ لَكُمْ عَدُوٌۢ ۚ بِئْسَ لِلظَّٰلِمِينَ بَدَلًا ﴿٥٠﴾

50. (Xusuuso) markaan ku nidhi malaa'igta u sujuuda Aadam, oo ay sujuudeen Ibliis mooyee, wuxuu ka mid ahaa jinniga wuxuuna ka faasiqoobay (baxay) amarka Alle, miyaad ka yeelanaysaan isaga iyo faraciisa gargaarayaal ani ka sokow iyagoo col idiin ah, waxaa u baasle daalimiinta waxa ay beddel qaateen oo Ibliis iyo fariciisi ah.

مَّآ أَشْهَدتُّهُمْ خَلْقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَلَا خَلْقَ أَنفُسِهِمْ وَمَا كُنتُ مُتَّخِذَ ٱلْمُضِلِّينَ عَضُدًا ﴿٥١﴾

51. Marag ugama dhigin kuwaas abuurka samooyinka iyo dhulka iyo abuurka naftooda, mana ihi mid ka yeelan baadiyayaalka kaalmo.

وَيَوْمَ يَقُولُ نَادُوا۟ شُرَكَآءِىَ ٱلَّذِينَ زَعَمْتُمْ فَدَعَوْهُمْ فَلَمْ يَسْتَجِيبُوا۟ لَهُمْ وَجَعَلْنَا بَيْنَهُم مَّوْبِقًا ﴿٥٢﴾

52. (Xusuuso) maalinta Alle dhihi u yeedha kuwaad ila wadaajiseen (cibaadada) ood sheegateen (adduunka) markaasay u yeedheen mana ajiibin (u jawaabin) waxaanna yeellay dhexdooda meel halaag.

وَرَءَا ٱلْمُجْرِمُونَ ٱلنَّارَ فَظَنُّوٓا۟ أَنَّهُم مُّوَٰقِعُوهَا وَلَمْ يَجِدُوا۟ عَنْهَا مَصْرِفًا ﴿٥٣﴾

53. Waxayna arkaan dambiilayaashu naarta waxayna yaqiinsan inay ku dhici mana helayaan xaggeeda meelay uga iishaan.

وَلَقَدْ صَرَّفْنَا فِى هَٰذَا ٱلْقُرْءَانِ لِلنَّاسِ مِن كُلِّ مَثَلٍ ۚ وَكَانَ ٱلْإِنسَٰنُ أَكْثَرَ شَىْءٍ جَدَلًا ﴿٥٤﴾

54. Dhab ahaan yaan ugu caddaynay quraankan dadka tusaale kasta, waxayna ahaadeen dadkii kuwo muran badan.

Ibliis iyo madax adayggiisa iyo siduu dadka u duufsaday xaqa iyo amarka Alle na u diiday wax badan yuu quraanku soo celceliyey si looga digtoonaado, wax Alle la maamula xukunka ama uu abuuridda marag uga dhigan ma jiro, qiyaamadana ibliis iyo kuwii caabudi jiray oo warkiisa maqlay wax isuma taraan, waxayna yaqiinsan inay halaagsami meelay uga leexdaanna ayna helayn. Quraankana wax badan yuu Alle ku celceliyey waano iyo tusaale waxayse noqdeen dadkii muran badane. Xasan Basri wuxuu yidhi: ibliiska ka mid ma noqon malaa'igta il bidhiqsi, waase asalka jinniga, sida aadanba u yahay asalka dadka. Waxaa wariyey (Ibnu Jariir). Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu subax toosiyey sayid Cali iyo Faadumo kuna yidhi: miyeydaan tukaneyn, markaasuu sayid Cali yidhi Rasuulka Allow naftannada Alle ayaa maamula markuu na kiciyo yaannu kacaynaa, markaasuu jeedsadey Nabigii isagoo akhrin aayadda, (wuxuu noqday dad wax walba ka muran badane), waxaa wariyey (Bukhaari, Muslim iyo Imaam Axmed). **[Al-Kahf: 50-54].**

وَمَا مَنَعَ ٱلنَّاسَ أَن يُؤْمِنُوٓاْ إِذْ جَآءَهُمُ ٱلْهُدَىٰ وَيَسْتَغْفِرُواْ رَبَّهُمْ إِلَّآ أَن تَأْتِيَهُمْ سُنَّةُ ٱلْأَوَّلِينَ أَوْ يَأْتِيَهُمُ ٱلْعَذَابُ قُبُلًا ﴿٥٥﴾

55. Wax ka reebay dadka inay rumeeyaan markuu u yimid hanuunku oy dambi dhaaf warsadaan Rabbigood ma jiro oon ahayn (sugid) inay u timaaddo waddadii kuwii hore, ama ugu yimaaddo cadaab caddaan.

وَمَا نُرْسِلُ ٱلْمُرْسَلِينَ إِلَّا مُبَشِّرِينَ وَمُنذِرِينَ ۚ وَيُجَٰدِلُ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ بِٱلْبَٰطِلِ لِيُدْحِضُواْ بِهِ ٱلْحَقَّ ۖ وَٱتَّخَذُوٓاْ ءَايَٰتِى وَمَآ أُنذِرُواْ هُزُوًا ﴿٥٦﴾

56. Mana dirro rasuullada iyagoon bishaarayneyn oon digayn, waxayna ku murmi kuwii gaaloobay xumaan inay ku buriyaan xaqa, waxayna ka yeesheen aayaadkeygii iyo wixii loogu digay jeesjees.

وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّن ذُكِّرَ بِـَٔايَٰتِ رَبِّهِۦ فَأَعْرَضَ عَنْهَا وَنَسِىَ مَا قَدَّمَتْ يَدَاهُ ۚ إِنَّا جَعَلْنَا عَلَىٰ قُلُوبِهِمْ أَكِنَّةً أَن يَفْقَهُوهُ وَفِىٓ ءَاذَانِهِمْ وَقْرًا ۖ وَإِن تَدْعُهُمْ إِلَى ٱلْهُدَىٰ فَلَن يَهْتَدُوٓاْ إِذًا أَبَدًا ﴿٥٧﴾

57. Ruuxna kama dulmi badna cid lagu waaniyey aayaadka Allehiis markaas ka jeedsaday xaggeeda oo halmaamay waxay hormarsadeen gacmihiisu, waxaan yeellay quluubtooda dabool inayan fahmin quraanka dhagahooda culays haddaad

ugu yeedho hanuunkana ma hanuunayaan waligood.

58. Allehaa waa dambi dhaafe naxariis leh hadduu u qaban dadka waxay kasbadeen (oo xumaan ah) wuxuu u dadajin lahaa cadaabka, waxayse leeyihiin ballan oyna helayn meelay uga iishaan.

وَرَبُّكَ ٱلْغَفُورُ ذُو ٱلرَّحْمَةِ ۖ لَوْ يُؤَاخِذُهُم بِمَا كَسَبُوا۟ لَعَجَّلَ لَهُمُ ٱلْعَذَابَ ۚ بَل لَّهُم مَّوْعِدٌ لَّن يَجِدُوا۟ مِن دُونِهِۦ مَوْئِلًا ﴿٥٨﴾

59. Taasi waa magaalooyinkii oon halaagnay markay dulmi faleen waxaanna u yeellay halaaggoodii ballan (waqti).

وَتِلْكَ ٱلْقُرَىٰٓ أَهْلَكْنَٰهُمْ لَمَّا ظَلَمُوا۟ وَجَعَلْنَا لِمَهْلِكِهِم مَّوْعِدًا ﴿٥٩﴾

Gaalada waxaa xaqa rumeyntiisa ka reebay kibir iyo inay maraan waddadii kuwii hore inta cadaab ugaga yimaaddo, rasuulladana waxaa loo diray bishaarayn iyo digid. Gaalase muran iyo xaqooy ku tirtiraan xumaan iyo jeesjees waxaan ahayn ma rabaan, dulmina wuxuu ku dhan yahay ruux quraanka lagu waaniyey oo halmaamay waxay hormarsadeen gacmihiisu oo xumaana, illeen qalbigoodaa ka daboolan inay fahmaan, dhagana waa ka culus yihiin mana hanuunaan.

Alle ayaase dambi dhaaf iyo naxariis leh, hadduu dadka u qaban waxay kasban oo xumaan ah wuxuu u soo dadejin lahaa ciqaabta, wuxuuse u yeelay waqti ayan meella uga bixi karin, raadkii ummadihii hore ee la halaagayna waa muuqdaa markay xumaanta faleen waxaana loo yeelay halaaggooda waqti xadidan, xaqoo la diido, ku jeesjeeskiisa, waanadoo laga jeedsado, iyo xumaanta oo dhanba waxay sababi ciqaab iyo halaag ee waa in laga digtoonaado lagana fogaado. **[Al-Kahf: 55-59].**

60. (Xusuuso) markuu ku yidhi (Nabi) Muuse yarkiisii (ardaygiisii) ma joogayo intaan ka gaadho kulanka labada badood, amaan socdo muddo.

وَإِذْ قَالَ مُوسَىٰ لِفَتَىٰهُ لَآ أَبْرَحُ حَتَّىٰٓ أَبْلُغَ مَجْمَعَ ٱلْبَحْرَيْنِ أَوْ أَمْضِىَ حُقُبًا ﴿٦٠﴾

61. Markay gaadheen kulankooda waxay halmaameen kalluunkoodii oo ka dhigtay

فَلَمَّا بَلَغَا مَجْمَعَ بَيْنِهِمَا نَسِيَا حُوتَهُمَا فَٱتَّخَذَ سَبِيلَهُۥ فِى ٱلْبَحْرِ سَرَبًا ﴿٦١﴾

waddadiisa badda dhexdeeda godoo kale.

62. Markay tallaabeen yuu ku yidhi khaadimkiisii ina sii qadadeenna waxaan kala kulannay safarkeenna daale.

فَلَمَّا جَاوَزَا قَالَ لِفَتَىٰهُ ءَاتِنَا غَدَآءَنَا لَقَدْ لَقِينَا مِن سَفَرِنَا هَٰذَا نَصَبًا ﴿٦٢﴾

63. Wuxuu yidhi (yarkii) ka warran markaan u dumannay dhagixii inaan halmaamay kalluunkii wax i halmaansiiyey oon shaydaan ahayn inaan xusuusto ma jiro, wuxuuna ka dhigtay waddadiisa badda la yaab.

قَالَ أَرَءَيْتَ إِذْ أَوَيْنَآ إِلَى ٱلصَّخْرَةِ فَإِنِّى نَسِيتُ ٱلْحُوتَ وَمَآ أَنسَىٰنِيهُ إِلَّا ٱلشَّيْطَٰنُ أَنْ أَذْكُرَهُۥ ۚ وَٱتَّخَذَ سَبِيلَهُۥ فِى ٱلْبَحْرِ عَجَبًا ﴿٦٣﴾

64. Wuxuu yidhi (Nabi Muuse): kaasi waa kaan doonaynay, waxayna ku noqdeen raadkoodii iyagoo raaci.

قَالَ ذَٰلِكَ مَا كُنَّا نَبْغِ ۚ فَٱرْتَدَّا عَلَىٰٓ ءَاثَارِهِمَا قَصَصًا ﴿٦٤﴾

65. Waxayna ka heleen addoon ka mid ah addoommadannada oon siinnay naxariis agtannada ah ka barneyna agtannada cilmi.

فَوَجَدَا عَبْدًا مِّنْ عِبَادِنَآ ءَاتَيْنَٰهُ رَحْمَةً مِّنْ عِندِنَا وَعَلَّمْنَٰهُ مِن لَّدُنَّا عِلْمًا ﴿٦٥﴾

Waxay ahayd qisadu in Nabi Muuse loo sheegay in nin yaqaanna wuxuusan aqoonnin uu joogo meelay labada badood ku kulmaan: tan Ruum iyo Faaris, ama afrikada waqooyi, saasayna u qaateen sahay kalluun, markay meeshii ay u socdeen gaareenna waxay halmaameen kalluunkii markay xusuusteenna ku soo noqdeen, halkaasna kula kulmeen addoon Alle oo suubban, «Khadir». Waxayna ku tusin qisadu waynida awoodda Alle iyo inuu wax walba karo, in cilmiga loo safro oo had iyo jeer la korosado, oon la dhihin waan waynahay ama waxbaan aqaan, day Nabi Muuse iyo ardaygiisaba, inayna jirin cid wax walba og oon Alle ahayn, Alle na wuu canaantaa oo imtixaamaa cidduu doono siduu Nabi Muuse ku falay markuu cilmi sheegtay, in ogaanshaha iyo cilmiguba Alle agtiisa yihiin cidduu doonana baro. **[Al-Kahf: 60-65].**

66. Wuxuu ku yidhi Muuse ma ku raaci karaa inaad i bartid waxa lagu baray oo hanuun ah.

قَالَ لَهُۥ مُوسَىٰ هَلْ أَتَّبِعُكَ عَلَىٰٓ أَن تُعَلِّمَنِ مِمَّا عُلِّمْتَ رُشْدًا ﴿٦٦﴾

67. Wuxuuna ku yidhi (Khadir) adigu ma karaysid la jirkayga samir.

قَالَ إِنَّكَ لَن تَسْتَطِيعَ مَعِيَ صَبْرًا ﴿٦٧﴾

68. Seed ugu samri waxaadan ku koobin cilmi (aqoon).

وَكَيْفَ تَصْبِرُ عَلَىٰ مَا لَمْ تُحِطْ بِهِۦ خُبْرًا ﴿٦٨﴾

69. Wuxuu yidhi (Muuse) waad i heli hadduu Alle doono mid ku samra oon kuguna caasiyin arrin.

قَالَ سَتَجِدُنِيٓ إِن شَآءَ ٱللَّهُ صَابِرًا وَلَآ أَعْصِى لَكَ أَمْرًا ﴿٦٩﴾

70. Wuxuu yidhi haddaad i raacdo hay waydiinnin waxba intaan kaaga sheego (warramo).

قَالَ فَإِنِ ٱتَّبَعْتَنِى فَلَا تَسْـَٔلْنِى عَن شَىْءٍ حَتَّىٰٓ أُحْدِثَ لَكَ مِنْهُ ذِكْرًا ﴿٧٠﴾

71. Way tageen intay ka koreen markab oo uu rujiyey (loox) markaas uu yidhi ma waxaad u rujisay inaad dadkeeda maansheyso waxaad la timid arrin wayn.

فَٱنطَلَقَا حَتَّىٰٓ إِذَا رَكِبَا فِى ٱلسَّفِينَةِ خَرَقَهَا ۖ قَالَ أَخَرَقْتَهَا لِتُغْرِقَ أَهْلَهَا لَقَدْ جِئْتَ شَيْـًٔا إِمْرًا ﴿٧١﴾

72. Wuxuu ku yidhi miyaanan ku dhihin adigu ma karaysid la jirkayga samir.

قَالَ أَلَمْ أَقُلْ إِنَّكَ لَن تَسْتَطِيعَ مَعِىَ صَبْرًا ﴿٧٢﴾

73. Wuxuu yidhi (Muuse) ha ii qabannin waxaan halmaamay hana igu mashaqayn amarkayga si dhib ah.

قَالَ لَا تُؤَاخِذْنِى بِمَا نَسِيتُ وَلَا تُرْهِقْنِى مِنْ أَمْرِى عُسْرًا ﴿٧٣﴾

74. Way tageen intay kala kulmaan wiil (yar) markaasuu dilay, markaasuu yidhi Muuse ma waxaad dishay naf daahir ah oon naf dilin, waxaad la timid shay la inkiro.

فَٱنطَلَقَا حَتَّىٰٓ إِذَا لَقِيَا غُلَٰمًا فَقَتَلَهُۥ قَالَ أَقَتَلْتَ نَفْسًا زَكِيَّةًۢ بِغَيْرِ نَفْسٍ لَّقَدْ جِئْتَ شَيْـًٔا نُّكْرًا ﴿٧٤﴾

75. Wuxuu yidhi miyaanan kuu dhihin adigu ma karaysid la jirkayga samir.

۞ قَالَ أَلَمْ أَقُل لَّكَ إِنَّكَ لَن تَسْتَطِيعَ مَعِىَ صَبْرًا ﴿٧٥﴾

76. Wuxuu yidhi haddaan ku warsado wax tan dabadeed hayla saaxiibin waxaad gaadhay garowsho xaggayga ahe.

قَالَ إِن سَأَلْتُكَ عَن شَيْءٍ بَعْدَهَا فَلَا تُصَٰحِبْنِى ۖ قَدْ بَلَغْتَ مِن لَّدُنِّى عُذْرًا ﴿٧٦﴾

Way israaceen Muuse iyo Khadir in Muuse wax la baro, taasina ceeb ma aha in cid wax ka qarsoomo oo ka barto cid kale haba ka waynaadee, hase yeeshee waxyaaluhuu sameeyey Muusana kula yaabay sida markabka looxa uu ka bixiyey iyo yarka uu dilay, had iyo jeerna wuxuu dhahaa uma adkeysan kartid la socodkeyga. Arrimaha Alle iyo xigmaddiisa yaana wax walba ka sarreeya. **[Al-Kahf: 66-76].**

77. Way tageen intay ka yimaadaan magaalo oy warsadaan cunno dadkeeda wayna diideen inay martigaliyaan waxayna heleen darbi dooni inuu dumo markaasuu joojiyey wuxuuna yidhi haddaad doonto waxaad ka yeelan lahayd ujuuro.

فَٱنطَلَقَا حَتَّىٰٓ إِذَآ أَتَيَآ أَهْلَ قَرْيَةٍ ٱسْتَطْعَمَآ أَهْلَهَا فَأَبَوْا۟ أَن يُضَيِّفُوهُمَا فَوَجَدَا فِيهَا جِدَارًا يُرِيدُ أَن يَنقَضَّ فَأَقَامَهُۥ ۖ قَالَ لَوْ شِئْتَ لَتَّخَذْتَ عَلَيْهِ أَجْرًا ﴿٧٧﴾

78. Wuxuu yidhi kan waa kala taggii dhexdeenna, waxaana kaaga warrami fasiraadda waxaadan karin inaad ku samirto.

قَالَ هَٰذَا فِرَاقُ بَيْنِى وَبَيْنِكَ ۚ سَأُنَبِّئُكَ بِتَأْوِيلِ مَا لَمْ تَسْتَطِع عَّلَيْهِ صَبْرًا ﴿٧٨﴾

79. Markabka waxaa lahaa masaakiin ka shaqqeeya badda waxaana doonay inaan ceebeeyo waxaana ahaa hortooda xaakim xoog ku qaata doon kasta (oo fayow).

أَمَّا ٱلسَّفِينَةُ فَكَانَتْ لِمَسَٰكِينَ يَعْمَلُونَ فِى ٱلْبَحْرِ فَأَرَدتُّ أَنْ أَعِيبَهَا وَكَانَ وَرَآءَهُم مَّلِكٌ يَأْخُذُ كُلَّ سَفِينَةٍ غَصْبًا ﴿٧٩﴾

80. Wiilkana waxay ahaayeen labadiisii waalid mu'miniin waxaanna ka cabsannay inuu ku mashaqeeyo xadgudub iyo (gaalnimo).

وَأَمَّا ٱلْغُلَٰمُ فَكَانَ أَبَوَاهُ مُؤْمِنَيْنِ فَخَشِينَآ أَن يُرْهِقَهُمَا طُغْيَٰنًا وَكُفْرًا ﴿٨٠﴾

فَأَرَدْنَآ أَن يُبْدِلَهُمَا رَبُّهُمَا خَيْرًا مِّنْهُ زَكَوٰةً وَأَقْرَبَ رُحْمًا ﴿٨١﴾

81. Waxaanna doonnay inuu ugu badalo Rabbigood mid ka khayr roon daahirnimo iyo u dhawi naxariis.

وَأَمَّا ٱلْجِدَارُ فَكَانَ لِغُلَٰمَيْنِ يَتِيمَيْنِ فِى ٱلْمَدِينَةِ وَكَانَ تَحْتَهُۥ كَنزٌ لَّهُمَا وَكَانَ أَبُوهُمَا صَٰلِحًا فَأَرَادَ رَبُّكَ أَن يَبْلُغَآ أَشُدَّهُمَا وَيَسْتَخْرِجَا كَنزَهُمَا رَحْمَةً مِّن رَّبِّكَ ۚ وَمَا فَعَلْتُهُۥ عَنْ أَمْرِى ۚ ذَٰلِكَ تَأْوِيلُ مَا لَمْ تَسْطِع عَّلَيْهِ صَبْرًا ﴿٨٢﴾

82. Darbigana waxaa lahaa labo wiil oo agoon ah oo magaalada, waxaana hoostiisa ahaa kansi ay leeyihiin, wuxuuna ahaa aabahood mid suubban, wuxuuna doonay Allehaa inay gaadhaan xooggooda lana baxaan kansigooda naxariista Allehaa dartiis, uma falin ra'yigayga, kaasi waa fasirka waxaadan karin samirkiisa*.

Way socdeen Muuse iyo Khadir intay ka yimaaddaan magaalo oyna warsadeen cunno, wayna u diideen markaasay arkeen darbi dhacaya waxaana toosiyey Khadir. Markaasuu yidhi Muuse maad ujuuro ka qaadatid, markaasuu yidhi Khadir: halkan waa meeshaan ku kala tagaynay, wuxuuna u fasiray arrimihii uu soo mariyey oo ah in markabka masaakiin lahayd kuna dhawaa xaakim xooga doonta fiican saasna u waxyeelleeyey. Yarkuna ma fiicnayn wuuna dilay si uusan u gaalayn waalidka, darbigana agoon aabahood wanaagsanaa yaa lahaa waxaana ku hoos jiray kansi si ay ula baxaan, arrimahaasna waxay ku dhaceen idamka Alle, taasina waxay ku tusin in Alle ogyahay maslaxadda iyo waxa wanaagsan dadkase waxaa la faray wanaag iyo camal fiican. **[Al-Kahf: 77-82].**

* *Qisadan kuma tusineeyso in ay u bannaan tahay qof inuusan ku dhaqmin sharciga islaamka isagoo sheeganayo cilmi qarsoon oo la siiyay darteed, waayo khadar wuxuu ahaa Nabi loo waxyoonayay sida uu u yidhi «kama sameeyn ra'yigeeyga». Waxaad ogtahay in aan Nabigeenna Nabi ka dambeeyn; culumadana waxay ku xukmiyeen gaalnimo qofkii saas sheegta, mana jiro cilmi baadhin iyo cilmidaahir (dib u eegaha).*

وَيَسْـَٔلُونَكَ عَن ذِى ٱلْقَرْنَيْنِ ۖ قُلْ سَأَتْلُوا۟ عَلَيْكُم مِّنْهُ ذِكْرًا ﴿٨٣﴾

83. Waxay ku warsan dul qarnayn xaggiisa waxaad dhahdaa waxaan idinku akhrin xaggiisa war (waxyi).

إِنَّا مَكَّنَّا لَهُۥ فِى ٱلْأَرْضِ وَءَاتَيْنَٰهُ مِن كُلِّ شَىْءٍ سَبَبًا ﴿٨٤﴾

84. Annagaa makaninnay (siinnay) xukun dhulka waxaanna u siinnay wax kasta sabab (cilmi).

فَأَتْبَعَ سَبَبًا ﴿٨٥﴾

85. Wuxuuna raacay waddo.

حَتَّىٰٓ إِذَا بَلَغَ مَغْرِبَ ٱلشَّمْسِ وَجَدَهَا تَغْرُبُ فِى عَيْنٍ حَمِئَةٍ وَوَجَدَ عِندَهَا قَوْمًا ۗ قُلْنَا يَٰذَا ٱلْقَرْنَيْنِ إِمَّآ أَن تُعَذِّبَ وَإِمَّآ أَن تَتَّخِذَ فِيهِمْ حُسْنًا ﴿٨٦﴾

86. Markuu gaadhay qorrax u dhacna wuxuu helay iyadoo ku dhici il dhoobo ah (muuqaalka) wuxuuna ka helay agteeda qoom, waxaana nidhi Dul Qarnaynow waa inaad cadaabto ama ka yeelato wanaag.

قَالَ أَمَّا مَن ظَلَمَ فَسَوْفَ نُعَذِّبُهُۥ ثُمَّ يُرَدُّ إِلَىٰ رَبِّهِۦ فَيُعَذِّبُهُۥ عَذَابًا نُّكْرًا ﴿٨٧﴾

87. Wuxuuna yidhi ruuxii dulmi fala waannu cadaabi (ciqaabi) markaasaa loo celin Allehiis wuuna cadaabi cadaab daran.

وَأَمَّا مَنْ ءَامَنَ وَعَمِلَ صَٰلِحًا فَلَهُۥ جَزَآءً ٱلْحُسْنَىٰ ۖ وَسَنَقُولُ لَهُۥ مِنْ أَمْرِنَا يُسْرًا ﴿٨٨﴾

88. Ruuxiise rumeeya oo fala wanaag wuxuu mudan abaal fiican waxaanna u dhihi amarkannaga fudayd.

ثُمَّ أَتْبَعَ سَبَبًا ﴿٨٩﴾

89. Markaasuu raacay waddo.

حَتَّىٰٓ إِذَا بَلَغَ مَطْلِعَ ٱلشَّمْسِ وَجَدَهَا تَطْلُعُ عَلَىٰ قَوْمٍ لَّمْ نَجْعَل لَّهُم مِّن دُونِهَا سِتْرًا ﴿٩٠﴾

90. Markuu gaadhay qorrax ka soo baxna wuxuu helay iyadoo ku soo baxda qoom aannaan yeelin sokeydeeda asturaad.

كَذَٰلِكَ ۖ وَقَدْ أَحَطْنَا بِمَا لَدَيْهِ خُبْرًا ﴿٩١﴾

91. Arrinku waa sidaas (aan sheegnay), waxaan ku koobnay waxa (Dulqarnayn) agtiisa ah ogaansho.

Qisada Dul Qarnayn iyo in Alle siiyey xukun ballaadhay oo gaadhay bari iyo galbeed iyo waxyaaluhuu la kulmay waa in ruuxa muslimka ah rumeeyaa illeen quraankaa sheegay, Alle na wuxuu doono wuu falaa, waxaana quraanka ka muuqata inuu ahaa nin wanaagsan oo xaqa rumeeyey. Arrinta la sheegi

oo ah inuu ahaa kii dhisay Iskandiriyada Masar oon mu'min ahayn waxaa diidi waxaan soo sheegnay iyo in culimada islaamku sheegeen inuu ahaa nin mu'min ah oo joogay waqtigii Nabi Ibraahim, mana wanaagsana in lagu dagdago taariikhda inta la yaqiinsanaayo, mana bannaana in war kale laga horkeeno quraanka oo la dhaho saasuu sheegi quraanku, xaalkuna waa saas, ruuxa rumeeyey waa inuu raaco quraanka kaan rumeynna loo sheego hadduu rumeeyana wanaag haddii kalana wuu khasaaray. **[Al-Kahf: 83-91].**

ثُمَّ أَتۡبَعَ سَبَبًا ﴿٩٢﴾

92. Markaasuu raacay waddo.

حَتَّىٰٓ إِذَا بَلَغَ بَيۡنَ ٱلسَّدَّيۡنِ وَجَدَ مِن دُونِهِمَا قَوۡمًا لَّا يَكَادُونَ يَفۡقَهُونَ قَوۡلًا ﴿٩٣﴾

93. Markuu gaadhay inta u dhexeysa labada buurood ee xijaabaya waxa ka danbeeya wuxuu ka helay hortooda qoom aan garanayn hadal (af gaar ah ku hadla).

قَالُواْ يَٰذَا ٱلۡقَرۡنَيۡنِ إِنَّ يَأۡجُوجَ وَمَأۡجُوجَ مُفۡسِدُونَ فِي ٱلۡأَرۡضِ فَهَلۡ نَجۡعَلُ لَكَ خَرۡجًا عَلَىٰٓ أَن تَجۡعَلَ بَيۡنَنَا وَبَيۡنَهُمۡ سَدّٗا ﴿٩٤﴾

94. Waxayna dheheen Dul Qarnaynow yaajuuj iyo maajuuj waxay fasaadin dhulka ee ma kuu yeellaa ujuuro inaad yeesho dhexdannada derbi xijaaba.

قَالَ مَا مَكَّنِّي فِيهِ رَبِّي خَيۡرٞ فَأَعِينُونِي بِقُوَّةٍ أَجۡعَلۡ بَيۡنَكُمۡ وَبَيۡنَهُمۡ رَدۡمًا ﴿٩٥﴾

95. Wuxuu yidhi wuxuu i makaniyey (i siiyey) Rabbigey yaa ka khayr roon ee igu caawiya xoog aan yeelo dhexdiinna xidheene.

ءَاتُونِي زُبَرَ ٱلۡحَدِيدِۖ حَتَّىٰٓ إِذَا سَاوَىٰ بَيۡنَ ٱلصَّدَفَيۡنِ قَالَ ٱنفُخُواْۖ حَتَّىٰٓ إِذَا جَعَلَهُۥ نَارٗا قَالَ ءَاتُونِيٓ أُفۡرِغۡ عَلَيۡهِ قِطۡرٗا ﴿٩٦﴾

96. I siiya goosimo bir ah, markuu ekeeyey labada dhinac dhexdooda wuxuu yidhi afuufa markuu ka yeelay dabna wuxuu yidhi i siiya aan ku shubee maar la dhalaaliyey.

فَمَا ٱسۡطَٰعُواْ أَن يَظۡهَرُوهُ وَمَا ٱسۡتَطَٰعُواْ لَهُۥ نَقۡبٗا ﴿٩٧﴾

97. Mana karayaan inay ka soo kor baxaan (ka soo dhacaan) mana karayaan inay duleeliyaan.

98. Wuxuuna yidhi kan waa naxariis Rabbigey, markuu yimaaddo yabooha Rabbigeyna wuxuu ka yeelaa burbur, yabooha Rabbigeyna waa xaq (sugan).

قَالَ هَٰذَا رَحْمَةٌ مِّن رَّبِّي ۖ فَإِذَا جَاءَ وَعْدُ رَبِّي جَعَلَهُۥ دَكَّآءَ ۖ وَكَانَ وَعْدُ رَبِّي حَقًّا ﴿٩٨﴾

Waxaa socotay qisadii dul qarnayn intuu ka gaadho gidaar xidhan oo ay ku ag nool yihiin dad af gaar ah ku hadli oon saas loo garanayn, kana cawday juuj iyo maajuuj oo ah kuwo fasaadin dhulka oyna ka codsadeen inuu jidaar adag dhex yeelo oy waxna siiyaan, wuxuuse u sheegay in Alle siiyey wax ka roon waxooda, kana codsaday inay xoog ku kaalmeeyaan una keenaan biro, markuu ekeeyeyna uu ku shubay maar iyo bir la dhalaaliyey kamana soo bixi karaan, waana naxariis Alle, markuuse yimaaddo yabooha Alle wuu burburiyaa, waana xaq yaboohiisu. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu ku yidhi xadiith dheer: waxaa dhexdiinna ah (qiyaamada) laba ummadood oo waxay ahaadaanba badiya, yaajuuj iyo wamaajuuj waana waajib in la rumeeyo jiriddooda hase yeeshee xaggee iyo sidee wax ma tarto. **[Al-Kahf: 92-98].**

99. Waxaannu ka yeeli qaarkood maalintaas kii qaarka (kale) dhexgali waxaana la afuufaa suurka waana soo kulminnaa kulmin.

* وَتَرَكْنَا بَعْضَهُمْ يَوْمَئِذٍ يَمُوجُ فِي بَعْضٍ ۖ وَنُفِخَ فِي ٱلصُّورِ فَجَمَعْنَٰهُمْ جَمْعًا ﴿٩٩﴾

100. Waxaanna u bandhigaynaa jahannamo maalintaa gaalaada bandhig.

وَعَرَضْنَا جَهَنَّمَ يَوْمَئِذٍ لِّلْكَٰفِرِينَ عَرْضًا ﴿١٠٠﴾

101. Waana kuway indhahoodu yihiin dabool dhexdiis xagga xuskayga mana aha kuwo kara (maqalka) xaqa.

ٱلَّذِينَ كَانَتْ أَعْيُنُهُمْ فِي غِطَآءٍ عَن ذِكْرِى وَكَانُوا۟ لَا يَسْتَطِيعُونَ سَمْعًا ﴿١٠١﴾

102. Ma waxay u maleeyeen kuwii gaaloobay inay ka yeesheen addoommadayda iga sokow awliyo (tu anfici inay tahay, saas ma aha arrintu) waana u darabnay jahannamo gaalada dagid.

أَفَحَسِبَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓا۟ أَن يَتَّخِذُوا۟ عِبَادِى مِن دُونِىٓ أَوْلِيَآءَ ۚ إِنَّآ أَعْتَدْنَا جَهَنَّمَ لِلْكَٰفِرِينَ نُزُلًا ﴿١٠٢﴾

قُلْ هَلْ نُنَبِّئُكُم بِٱلْأَخْسَرِينَ أَعْمَٰلًا ﴿١٠٣﴾

103. Waxaad dhahdaa ma idiin warramaa kuwa khasaaro badan camallo.

ٱلَّذِينَ ضَلَّ سَعْيُهُمْ فِى ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا وَهُمْ يَحْسَبُونَ أَنَّهُمْ يُحْسِنُونَ صُنْعًا ﴿١٠٤﴾

104. Waa kuwuu dhumay camalkoodu nolosha adduun iyagoo isuna malayn inay wanaajin camalka.

أُو۟لَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ بِـَٔايَٰتِ رَبِّهِمْ وَلِقَآئِهِۦ فَحَبِطَتْ أَعْمَٰلُهُمْ فَلَا نُقِيمُ لَهُمْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ وَزْنًا ﴿١٠٥﴾

105. Kuwaasu waa kuwa ka gaaloobay aayaadka Rabbigood iyo la kulankiisa oo uu buray camalkoodu umana joojinno maalinta qiyaame miisaan «qiimana ma leh».

ذَٰلِكَ جَزَآؤُهُمْ جَهَنَّمُ بِمَا كَفَرُوا۟ وَٱتَّخَذُوٓا۟ ءَايَٰتِى وَرُسُلِى هُزُوًا ﴿١٠٦﴾

106. Kaasina waa abaalkoodii jahannamo, gaalnimadooda darteed, waxayna ka yeesheen aayaadkayga iyo rasuulladayda jeesjees.

Maalinta qiyaame waa maalin dhibaato badan ciddii Alle ka fududeeyo mooyee, waana maalin la kulmin dadka oyna is dhexqaadi iskuna wareeri, gaaladana lagu kulmin naarta, kuwaasoo ah kuwa xaqa ka indha beelay oon maqlaynna, gaalada Alle ka sokow waxay caabudaan yeeshayna waxaa loo darbay naarta jahannamo. Kuwa ugu khasaara badanna waa kuwa camalkoodu ku dhumay adduunka isuna malayn inay wanaag fali, kana gaaloobay quraanka, iyo la kulanka Alle, wax qiima ahna loo yeeli maayo qiyaamada, illeen way gaaloobeen ooy ku jeesjeeseen quraanka iyo Rasuulkaba, Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: waxaa la keeni qiyaamada nin wayn oo shilis (cayilan) oon u miisaanmayn garab kaneeco. Sacad binu Abii Waqaasna waxaa laga wariyey: kuwa ugu khasaaro badan camal waa yuhuud iyo nasaaro. Waxayna ku tusin in la digtoonaado oo la toosnaado. **[Al-Kahf: 99-106].**

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ كَانَتْ لَهُمْ جَنَّٰتُ ٱلْفِرْدَوْسِ نُزُلًا ﴿١٠٧﴾

107. Kuwa rumeeyey (xaqa) oo fala camal fiican waxay u ahaatay jannada firdowso degid. (Martiqaad).

خَٰلِدِينَ فِيهَا لَا يَبْغُونَ عَنْهَا حِوَلًا ﴿١٠٨﴾

108. Wayna ku waari dhexdeeda mana doonaan inay xaggeeda

ka wareegaan (guuraan).

109. Waxaad dhahdaa hadday u noqoto badda khad kalimooyinka Rabbigey waxaa dhammaan lahaa badda ka hor dhammaanshaha kalimaadka Rabbigey aaban keenno isagoo kale (oo siyaadin ah).

قُل لَّوْ كَانَ ٱلْبَحْرُ مِدَادًا لِّكَلِمَٰتِ رَبِّى لَنَفِدَ ٱلْبَحْرُ قَبْلَ أَن تَنفَدَ كَلِمَٰتُ رَبِّى وَلَوْ جِئْنَا بِمِثْلِهِۦ مَدَدًا ﴿١٠٩﴾

110. Waxaad dhahdaa waxaan uun ahay anigu bashar (dad) idinkoo kale ah, waxaa lay waxyooday in uun uu yahay kan cibaadada idinka mudan Ilaah kaliya, ruuxiise dooni la kulanka Allehiis ha falo camal fiican, yuuna la wadaajinna cibaadada Allehiis cidna.

قُلْ إِنَّمَآ أَنَا۠ بَشَرٌ مِّثْلُكُمْ يُوحَىٰٓ إِلَىَّ أَنَّمَآ إِلَٰهُكُمْ إِلَٰهٌ وَٰحِدٌ ۖ فَمَن كَانَ يَرْجُوا۟ لِقَآءَ رَبِّهِۦ فَلْيَعْمَلْ عَمَلًا صَٰلِحًا وَلَا يُشْرِكْ بِعِبَادَةِ رَبِّهِۦٓ أَحَدًۢا ﴿١١٠﴾

Mu'miniinta camalka fiican wuxuu Alle u darbay jannada firdowsa oyna ku waari ka guuridna ayna doonayn, sida adduunka la dooni in marba meel loo guuro ama loo wareego, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: haddaad Alle warsataan janno warsada jannada firdowsa waa jannada ugu sarreysa uguna wanaagsan, kana soo burqadaan wabiyada jannada, (Bukhaari iyo Muslim).

Markaas waxay suuraddu ku dhammaatay waasacnimada cilmiga Alle iyo inuusan dhammaanayn haddii geedaha qalin laga dhigo sida suurad kale caddaysay, badahana khad laga dhigo. Nabiguna waa dad hase yeeshee loo waxyooday in Ilaah kali yahay loona kali yeelo camalka cid kalana lala wadaajin. Rabiic binu Anas wuxuu yidhi: cilmiga dadka dhammaan marka loo eego cilmiga Alle wuxuu la mid yahay dhibic badahoo dhan. (Xaakim).

Taasina waxay ku tusin inaan cidna cilmi ku faani karin, sheeganna karin, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: markuu Alle kulmiyo kuwii hore iyo kuwii dambaba maalin aan shaki lahayn waxaa dhawaaqa dhawaaqe ruuxii la wadaajiyey camal Alle cid kale ha ka doonto abaalkiisa, Alle waa ka kaaftoon yahay wadaage. (Imaam Axmed). Waxaa uun loo baahan yahay waa camal fiican oo Alle dartiis loo falo si Alle abaal wanaagsan looga helo. **[Al-Kahf :107-110].**

Suurat Maryam

سُورَةُ مَرۡيَمَ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Xarafyadan waa la soo sheegay kuwo la mid ah.

كٓهيعٓصٓ ١

2. (Kanna) waa sheegid naxariista Allahaa (u naxariistay) addoonkiisa Zakariye.

ذِكۡرُ رَحۡمَتِ رَبِّكَ عَبۡدَهُۥ زَكَرِيَّآ ٢

3. Markuu u dhawaaqay Rabbigiis dhawaaq qarsoodi ah.

إِذۡ نَادَىٰ رَبَّهُۥ نِدَآءً خَفِيًّا ٣

4. Yidhina Allow anigu waan tabaryaraaday madaxayguna wuxuu la huray cirro, mana ahayn baryadaada Allow mid ku khasaara.

قَالَ رَبِّ إِنِّي وَهَنَ ٱلۡعَظۡمُ مِنِّي وَٱشۡتَعَلَ ٱلرَّأۡسُ شَيۡبٗا وَلَمۡ أَكُنۢ بِدُعَآئِكَ رَبِّ شَقِيّٗا ٤

5. Anigu waxaan ka cabsan qaraabada iga dambaysa (inay xumaadaan) haweenaydayduna waa madhasho, iga sii agtaada wali (walad).

وَإِنِّي خِفۡتُ ٱلۡمَوَٰلِيَ مِن وَرَآءِي وَكَانَتِ ٱمۡرَأَتِي عَاقِرٗا فَهَبۡ لِي مِن لَّدُنكَ وَلِيّٗا ٥

6. Iga dhaxla (Nabinnimada) oo dhaxla ehelkii Yacquub kana yeel Allow mid laga raalli noqdo.

يَرِثُنِي وَيَرِثُ مِنۡ ءَالِ يَعۡقُوبَۖ وَٱجۡعَلۡهُ رَبِّ رَضِيّٗا ٦

7. Zakariyow annagu waxaannu kuugu bishaarayn wiil magaciisu yahay yaxye oonnaan u yeelin horay wax la mid ah (la magac ah).

يَٰزَكَرِيَّآ إِنَّا نُبَشِّرُكَ بِغُلَٰمٍ ٱسۡمُهُۥ يَحۡيَىٰ لَمۡ نَجۡعَل لَّهُۥ مِن قَبۡلُ سَمِيّٗا ٧

قَالَ رَبِّ أَنَّىٰ يَكُونُ لِي غُلَٰمٌ وَكَانَتِ ٱمْرَأَتِي عَاقِرًا وَقَدْ بَلَغْتُ مِنَ ٱلْكِبَرِ عِتِيًّا ﴿٨﴾

8. Wuxuu yidhi Allow sidee iigu ahaan wiil iyadooy tahay haweeneydaydu madhasho oon ka gaadhay waynida gabow.

قَالَ كَذَٰلِكَ قَالَ رَبُّكَ هُوَ عَلَيَّ هَيِّنٌ وَقَدْ خَلَقْتُكَ مِن قَبْلُ وَلَمْ تَكُ شَيْـًٔا ﴿٩﴾

9. Wuxuu yidhi: waa saas, wuxuuna Rabbigaa yidhi: abuuridda (yaxye) way ii fududdahay waana ku abuuray horay adoon ahayn waxba.

Nabi Zakariye yaa Alle waydiistay isagoo wayn haweenaydiisuna dhalin in Alle siiyo cid wanaagga iyo Nabinnimada ka dhaxasha, Alle na wuu aqbalay baryadiisii wuxuuna siiyey wiilkiisii Nabi Yaxye, markuu la yaabay xaalkiisa iyo kan ehelkiisa wuxuu Alle u sheegay inay u fududdahay illeen isagaba wuxuu abuuray isagoon waxaba ahayne.

Waxaa sugnaaday inaan Nabiyada laga dhaxlin xoolo ee laga dhaxlo cilmi. Tan kale waxay ku tusin in Alle aqbalo baryada addoommadiisa, wax walbana u fudud yahay hadduu doono, iyo in loo cabsado diinta iyo wanaagga iyo xaqa. **[Maryam: 1-9].**

قَالَ رَبِّ ٱجْعَل لِّيٓ ءَايَةً ۚ قَالَ ءَايَتُكَ أَلَّا تُكَلِّمَ ٱلنَّاسَ ثَلَٰثَ لَيَالٍ سَوِيًّا ﴿١٠﴾

10. Wuxuu yidhi Allow ii yeel calaamo (xaqnimada yaboohaada) wuxuu yidhi (Alle) calaamadaadu waa inaadan la hadlin dadka seddex habeen oo israacsan (adoo fayow).

فَخَرَجَ عَلَىٰ قَوْمِهِۦ مِنَ ٱلْمِحْرَابِ فَأَوْحَىٰٓ إِلَيْهِمْ أَن سَبِّحُوا۟ بُكْرَةً وَعَشِيًّا ﴿١١﴾

11. Markaasuu ugaga soo baxay qoomkiisii mixraabka wuxuuna u ishaaray xaggooda inay tukadaan aroor iyo galabba.

يَٰيَحْيَىٰ خُذِ ٱلْكِتَٰبَ بِقُوَّةٍ ۖ وَءَاتَيْنَٰهُ ٱلْحُكْمَ صَبِيًّا ﴿١٢﴾

12. (Waxaa loo yidhi) Yaxyow ku qaado kitaabka (Tawreed) xoog (dadaal), waxaan siinnay xigmo isagoo yar.

وَحَنَانًا مِّن لَّدُنَّا وَزَكَوٰةً ۖ وَكَانَ تَقِيًّا ﴿١٣﴾

13. Iyo naxariis agtannada ka ahaatay iyo daahirnimo wuxuuna ahaa dhawrsade.

وَبَرًّۢا بِوَٰلِدَيْهِ وَلَمْ يَكُن جَبَّارًا عَصِيًّا ﴿١٤﴾

14. Iyo baarri labadiisa waalid mana ahayn daalim caasi ah.

وَسَلَٰمٌ عَلَيْهِ يَوْمَ وُلِدَ وَيَوْمَ يَمُوتُ وَيَوْمَ يُبْعَثُ حَيًّا ﴿١٥﴾

15. Nabadgalyo korkiisa ha ahaato maalinta la dhalay iyo maalintuu dhiman iyo maalinta la soo bixin isagoo nool.

وَٱذْكُرْ فِى ٱلْكِتَٰبِ مَرْيَمَ إِذِ ٱنتَبَذَتْ مِنْ أَهْلِهَا مَكَانًا شَرْقِيًّا ﴿١٦﴾

16. (Ku xus) kitaabka (Quraan ka warki) Maryama, markay uga fogaatay ehelkeeda meel bari ah, (bariga Qudsi).

فَٱتَّخَذَتْ مِن دُونِهِمْ حِجَابًا فَأَرْسَلْنَآ إِلَيْهَا رُوحَنَا فَتَمَثَّلَ لَهَا بَشَرًا سَوِيًّا ﴿١٧﴾

17. Oyna ka yeelatay xaggooda astur, oon u dirray xaggeeda ruuxannagii (Jibriil), oo isugu shabbahay dad eg.

قَالَتْ إِنِّىٓ أَعُوذُ بِٱلرَّحْمَٰنِ مِنكَ إِن كُنتَ تَقِيًّا ﴿١٨﴾

18. Una tidhi anigu waxaan kaa magan galay (Allaha) Raxmaan ah haddaad tahay dhawrsade.

قَالَ إِنَّمَآ أَنَا۠ رَسُولُ رَبِّكِ لِأَهَبَ لَكِ غُلَٰمًا زَكِيًّا ﴿١٩﴾

19. Kuna yidhi anigu waxan uun ahay Rasuulka Allehaa inaan ku siiyo wiil daahir ah.

قَالَتْ أَنَّىٰ يَكُونُ لِى غُلَٰمٌ وَلَمْ يَمْسَسْنِى بَشَرٌ وَلَمْ أَكُ بَغِيًّا ﴿٢٠﴾

20. Waxayna tidhi sidee iigu ahaan wiil anoosan i taaban dad (nikaax), ahaynna mid xun oo sinaaysata.

قَالَ كَذَٰلِكِ قَالَ رَبُّكِ هُوَ عَلَىَّ هَيِّنٌ ۖ وَلِنَجْعَلَهُۥٓ ءَايَةً لِّلنَّاسِ وَرَحْمَةً مِّنَّا ۚ وَكَانَ أَمْرًا مَّقْضِيًّا ﴿٢١﴾

21. Wuuxuna yidhi waa sidaas, wuxuuna yidhi Allehaa wuu u fudud yahay korkayga iyo inaan uga yeello calaamad dadka iyo naxariis xaggayga ah waana arrin la xukumay (dhammeeyey).

Zakariye wuxuu Alle warsaday in calaamo loo yeelo arrinkaas, wuxuuna aamusnaa saddex habeen, wuxuuna ku hadlayey ishaaro, waxaana la siiyey Yaxye kitaab iyo xigmo, naxariis iyo daahirnimo wuxuuna ahaa dhawrsade,

u ah baarri labadiisa waalid, mana ahayn madax adke caasi ah, Alle na waa nabadgaliyey maalintii la dhalay, tuu dhiman iyo maalinta la soo bixin isagoo nool. Maryama qisadeedu waxay ahayd mid wayn, waxayna dhanka bari ee Qudsi ugaga qarsoontay dadkeedii, waxaana u yimid Jibriil oo bashar ku shabbahan waxayna ka magan gashay Alle, wuxuuna u sheegay in Alle u soo diray si uu wiil u siiyo, wayse yaabtay siday u heli wiil iyadoon nin qabin, mid xun oo suuqa gashana ahayn, Alle ayaase u sheegay in awoodda Alle u fududdahay, yahayna xaal dhammaysan. Waana soo sheegnay in si dhab ah oo nadiif ah loo rumeeyo arrintan innagoo ka duwan yahuud halaag ha ku dhacee. Illeen Rabbiga xaqa ah yaa si xaq ah uga warramaye. **[Maryam: 10-21].**

فَحَمَلَتْهُ فَٱنتَبَذَتْ بِهِۦ مَكَانًا قَصِيًّا ﴿٢٢﴾

22. Way xambaartay (uurowday) waxayna ula fogaatay meel dheer (durugsan).

فَأَجَآءَهَا ٱلْمَخَاضُ إِلَىٰ جِذْعِ ٱلنَّخْلَةِ قَالَتْ يَٰلَيْتَنِى مِتُّ قَبْلَ هَٰذَا وَكُنتُ نَسْيًا مَّنسِيًّا ﴿٢٣﴾

23. Waxayna u dhibaataysay fooshii jirrid timir waxayna tidhi shalleytee maan dhinto ka hor arrintan oon noqdo mid la halmaamo o laga tago.

فَنَادَىٰهَا مِن تَحْتِهَآ أَلَّا تَحْزَنِى قَدْ جَعَلَ رَبُّكِ تَحْتَكِ سَرِيًّا ﴿٢٤﴾

24. Wuxuuna uga dhawaaqay hoosteeda ha murugoonnin wuxuu yeelay Allehaa hoostaada wabi (yar).

وَهُزِّىٓ إِلَيْكِ بِجِذْعِ ٱلنَّخْلَةِ تُسَٰقِطْ عَلَيْكِ رُطَبًا جَنِيًّا ﴿٢٥﴾

25. Una gilgil xaggaaga jirridda timirta ha kuu soo riddo korkaaga timir (curdana) oo fiicane.

فَكُلِى وَٱشْرَبِى وَقَرِّى عَيْنًا ۖ فَإِمَّا تَرَيِنَّ مِنَ ٱلْبَشَرِ أَحَدًا فَقُولِىٓ إِنِّى نَذَرْتُ لِلرَّحْمَٰنِ صَوْمًا فَلَنْ أُكَلِّمَ ٱلْيَوْمَ إِنسِيًّا ﴿٢٦﴾

26. Ee cun oo cab qabowsana il (farax), haddaad ka aragto dadkana ruux waxaad dhahdaa anigu waxaan u nadray (Allaha) Raxmaan ah in aan u soomo oonan la hadlin maanta cidna.

فَأَتَتْ بِهِۦ قَوْمَهَا تَحْمِلُهُۥ ۖ قَالُوا۟ يَٰمَرْيَمُ لَقَدْ جِئْتِ شَيْـًٔا فَرِيًّا ﴿٢٧﴾

27. Waxayna ula timid Ciise qoomkeeda iyadoo xambaarsan waxayna dheheen maryamoy waxaad la timid wax wayn.

28. Haaruun walaashiisay (tii ninkaa wanaagsan uga ekeyd wanaagga) ma eheyn aabahaa ruux xun, mana ahayn hooyadaa mid xun (la tuhmo).

يَـٰٓأُخْتَ هَـٰرُونَ مَا كَانَ أَبُوكِ ٱمْرَأَ سَوْءٍ وَمَا كَانَتْ أُمُّكِ بَغِيًّا ﴿٢٨﴾

29. Wayna u ishaartay xaggiisa waxayna dhaheen sideen ula hadlaynaa ruux ku sugan sariirilmood isagoo yar.

فَأَشَارَتْ إِلَيْهِ ۖ قَالُوا۟ كَيْفَ نُكَلِّمُ مَن كَانَ فِى ٱلْمَهْدِ صَبِيًّا ﴿٢٩﴾

Wuxuu Alle kaga warramay aayadahan inay Maryan uurowday Nabi Ciise, oyna ka fogaatay qoomkeedii, ka dibna fooshii ku qabatay timir agteed, markaas jeclaatay inay dhimatoo la halmaamo, waana loo dhawaaqay, inayan walbahaarin, geedka timirta ahna ay lusho si midho uga soo daataan, waxaana loogu yeedhay inay ka cunto kana cabto togga, hadday aragto dadna ayan la hadlin, waxayna ula timid qoomkeedii iyadoo xambaarsan, waxayna dhaheen Maryamoy waxaad la timid wax wayn, aabahaa iyo hooyadaa midna ma xumayn, waxayna u ishaartay inay yarka la hadlaan iyagoo leh seen ula hadlaynaa ilmo sariirta jiifa. Waxaan soo sheegnay inay waajib tahay in awoodda Alle la rumeeyo loona hoggaansamo Alle iyo sharcigiisa. **[Maryam: 22-29].**

30. Wuxuuna yidhi (Ciise) anigu waxaan ahay addoon Alle, wuxuuna i siiyey kitaabka (injiil) wuxuuna iga yeelay Nabi.

قَالَ إِنِّى عَبْدُ ٱللَّهِ ءَاتَىٰنِىَ ٱلْكِتَـٰبَ وَجَعَلَنِى نَبِيًّا ﴿٣٠﴾

31. Wuxuuna iga yeelay mid la barakeeyey meel kastoon ahay, wuxuuna ii dardaarmay salaadda iyo zakada intaan noolahay.

وَجَعَلَنِى مُبَارَكًا أَيْنَ مَا كُنتُ وَأَوْصَـٰنِى بِٱلصَّلَوٰةِ وَٱلزَّكَوٰةِ مَا دُمْتُ حَيًّا ﴿٣١﴾

32. Wuxuuna iga yeelay baarriga waalidaday (hooyaday) igamana yeelin madax adage xun.

وَبَرًّۢا بِوَٰلِدَتِى وَلَمْ يَجْعَلْنِى جَبَّارًا شَقِيًّا ﴿٣٢﴾

33. Nabadgalyana ha ahaato korkayga maalintii lay dhalay iyo maalintaan dhiman iyo maalinta laysoo bixin anoo nool.

وَٱلسَّلَـٰمُ عَلَىَّ يَوْمَ وُلِدتُّ وَيَوْمَ أَمُوتُ وَيَوْمَ أُبْعَثُ حَيًّا ﴿٣٣﴾

34. Kaasi waa Ciise ibnu Maryama, waana hadalka xaqa ah ee ay shakin.

ذَٰلِكَ عِيسَى ٱبْنُ مَرْيَمَ ۚ قَوْلَ ٱلْحَقِّ ٱلَّذِى فِيهِ يَمْتَرُونَ ﴿٣٤﴾

35. Kuma habboona Alle inuu yeesho ilmo, waana ka nasahan yahay, markuu doono xukun «amar» wuxuu uun dhahaa ahaw wuuna ahaan.

مَا كَانَ لِلَّهِ أَن يَتَّخِذَ مِن وَلَدٍ ۖ سُبْحَٰنَهُۥٓ ۚ إِذَا قَضَىٰٓ أَمْرًا فَإِنَّمَا يَقُولُ لَهُۥ كُن فَيَكُونُ ﴿٣٥﴾

36. Ilaahay waa Rabbigey iyo Rabbigiin ee caabuda, kaasaa ah jidka toosane.

وَإِنَّ ٱللَّهَ رَبِّى وَرَبُّكُمْ فَٱعْبُدُوهُ ۚ هَٰذَا صِرَٰطٌ مُّسْتَقِيمٌ ﴿٣٦﴾

37. Wayse iskhilaafeen xisbiyadii dhexdooda, wuxuuna halaag uga sugnaaday kuwii gaaloobay imaatinka maalinta wayn (ee qiyaamada).

فَٱخْتَلَفَ ٱلْأَحْزَابُ مِنۢ بَيْنِهِمْ ۖ فَوَيْلٌ لِّلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مِن مَّشْهَدِ يَوْمٍ عَظِيمٍ ﴿٣٧﴾

38. Maqli ogaa oo arki ogaa maalintay noo imaan, hase yeeshee daalimiintu maanta waxay ku sugan yihiin baadi cad.

أَسْمِعْ بِهِمْ وَأَبْصِرْ يَوْمَ يَأْتُونَنَا لَٰكِنِ ٱلظَّٰلِمُونَ ٱلْيَوْمَ فِى ضَلَٰلٍ مُّبِينٍ ﴿٣٨﴾

39. Uga dig iyaga maalin qoomammo, marka la xukmin amarka iyagoo ku sugan halmaansho oon rumeynayn.

وَأَنذِرْهُمْ يَوْمَ ٱلْحَسْرَةِ إِذْ قُضِىَ ٱلْأَمْرُ وَهُمْ فِى غَفْلَةٍ وَهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٣٩﴾

40. Annagaa dhaxli dhulka iyo waxa korkiisa ah xaggannagaana (khalqiga) loo soo celin.

إِنَّا نَحْنُ نَرِثُ ٱلْأَرْضَ وَمَنْ عَلَيْهَا وَإِلَيْنَا يُرْجَعُونَ ﴿٤٠﴾

Alle ayaa ka hadliyey Nabi Ciise, wuxuuna sheegay inuu yahay addoon Alle oosan ahayn Ilaah, kitaabna siiyey Nabina ka dhigay, barakeeyeyna meel kastoos joogo, farayna salaadda iyo zakada intuu nool yahay iyo baarrinnimada hooyadiis, ahaynna mid xun, nabad geliyeyna meel kasta uu ahaan, qisadiisuna waa xaq, Alle na waa ka nasahan yahay ilmo yeelasho, wax walbana waa u fudud yahay, Alle na waa waaxid, inkastooy gaaladu isku khilaaftay oo halaag u sugnaan qiyaamada, oyna aad wax u maqli una arki maalinta qiyaame ee Alle u hadhi wax kasta. **[Maryam: 30-40].**

41. Ku sheeg kitaabka (Nabi) Ibraahim, wuxuu ahaa runbadane Nabi ah.

وَٱذْكُرْ فِى ٱلْكِتَٰبِ إِبْرَٰهِيمَ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ صِدِّيقًا نَّبِيًّا ﴿٤١﴾

42. Markuu ku yidhi aabbihiis aabbow maxaad u caabudi waxaan maqlayn, waxna arkayn, kaana deeqayn waxba.

إِذْ قَالَ لِأَبِيهِ يَٰٓأَبَتِ لِمَ تَعْبُدُ مَا لَا يَسْمَعُ وَلَا يُبْصِرُ وَلَا يُغْنِى عَنكَ شَيْـًٔا ﴿٤٢﴾

43. Aabbow aniga waxaa ii yimid cilmi waxaan adi kuu imaannin ee i raac aan kugu hanuuniyo jid toosane (xaqa).

يَٰٓأَبَتِ إِنِّى قَدْ جَآءَنِى مِنَ ٱلْعِلْمِ مَا لَمْ يَأْتِكَ فَٱتَّبِعْنِىٓ أَهْدِكَ صِرَٰطًا سَوِيًّا ﴿٤٣﴾

44. Aabbow ha caabudin shaydaan, shaydaanku wuxuu u yahay Allaha Raxmaan ah caasi.

يَٰٓأَبَتِ لَا تَعْبُدِ ٱلشَّيْطَٰنَ ۖ إِنَّ ٱلشَّيْطَٰنَ كَانَ لِلرَّحْمَٰنِ عَصِيًّا ﴿٤٤﴾

45. Aabbow anigu waxaan ka cabsan inuu ku taabto cadaabka Allaha Raxmaan ah ood u noqoto shaydaan qaraabo.

يَٰٓأَبَتِ إِنِّىٓ أَخَافُ أَن يَمَسَّكَ عَذَابٌ مِّنَ ٱلرَّحْمَٰنِ فَتَكُونَ لِلشَّيْطَٰنِ وَلِيًّا ﴿٤٥﴾

46. Wuxuu yidhi (aabbihiis) ma waxaad nici adigu ilaahyadayda Ibraahimow, hadaadan joogin waan ku dhagaxyeyn ee iga tag waligeed.

قَالَ أَرَاغِبٌ أَنتَ عَنْ ءَالِهَتِى يَٰٓإِبْرَٰهِيمُ ۖ لَئِن لَّمْ تَنتَهِ لَأَرْجُمَنَّكَ ۖ وَٱهْجُرْنِى مَلِيًّا ﴿٤٦﴾

47. Wuxuu yidhi (Nabi) Ibraahim nabadgalyo korkaaga ha ahaato waan kuu dambi dhaaf warsan adiga Rabbigey, Alle waa ii naxariiste ii baarri ah.

قَالَ سَلَٰمٌ عَلَيْكَ ۖ سَأَسْتَغْفِرُ لَكَ رَبِّىٓ ۖ إِنَّهُۥ كَانَ بِى حَفِيًّا ﴿٤٧﴾

48. Waana idinka fogaan idinka iyo waxad caabudaysaan oo Alle ka soo hadhay, waxaanna baryi Rabbigey, waxaanna mudan inaanan ku noqonnin baryada

وَأَعْتَزِلُكُمْ وَمَا تَدْعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ وَأَدْعُوا۟ رَبِّى عَسَىٰٓ أَلَّآ أَكُونَ بِدُعَآءِ رَبِّى شَقِيًّا ﴿٤٨﴾

Rabbigey mid ku xumaada (khasaara).

Qisada Nabi Ibraahim iyo aabbihiis iyo qoomkiisii wax badan yuu quraanku ka warramay, halkanna waxaa ka muuqda siduu Nabi Ibraahim ugu dadaalay wax u sheegga aabbihiis iyo wuxuu ugu jawaabay, waxaana muuqda baarrinnimadiisii oo ruux walba laga rabo inuu u wanaag falo waalidkiis diintaba ha kala duwanaadeene. Markuu ka noogay lana hadiday yuu u dambi dhaaf warsaday oo saameeyey waana intaan laga reebin wali, waana taas lagu kala tagay diinta darteed. Illeen diintu ma laha gorgortan iyo qaraabannimo, haddii xaqa la diidee. **[Maryam: 41-48].**

فَلَمَّا ٱعۡتَزَلَهُمۡ وَمَا يَعۡبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ وَهَبۡنَا لَهُۥٓ إِسۡحَٰقَ وَيَعۡقُوبَۖ وَكُلّٗا جَعَلۡنَا نَبِيّٗا ﴿٤٩﴾

49. Markuu ka fogaaday iyaga iyo waxay caabudi oo Alle ka soo hadhay waxaan siinnay Isxaaq iyo Yacquub, mid kastana waxaan ka yeellay Nabi.

وَوَهَبۡنَا لَهُم مِّن رَّحۡمَتِنَا وَجَعَلۡنَا لَهُمۡ لِسَانَ صِدۡقٍ عَلِيّٗا ﴿٥٠﴾

50. Waxaanna ka siinnay naxariistannada (wanaag) waxaanna u yeellay ammaan run ah oo sarraysa (hareysana).

وَٱذۡكُرۡ فِي ٱلۡكِتَٰبِ مُوسَىٰٓۚ إِنَّهُۥ كَانَ مُخۡلَصٗا وَكَانَ رَسُولٗا نَّبِيّٗا ﴿٥١﴾

51. Ku sheeg kitaabka (Nabi) Muuse (wuxuu ahaa ku la saafi yeelay) wuxuu ahaa rasuul Nabi ah.

وَنَٰدَيۡنَٰهُ مِن جَانِبِ ٱلطُّورِ ٱلۡأَيۡمَنِ وَقَرَّبۡنَٰهُ نَجِيّٗا ﴿٥٢﴾

52. Waana uga dhawaaqnay dhinaca (buurta) Dhuur ee midigta ah, waana soo dhawaynay annagoo la hadli.

وَوَهَبۡنَا لَهُۥ مِن رَّحۡمَتِنَآ أَخَاهُ هَٰرُونَ نَبِيّٗا ﴿٥٣﴾

53. Waxaanna ka siinnay naxariistannada walaalkiis Haaruun oo Nabi ah.

وَٱذۡكُرۡ فِي ٱلۡكِتَٰبِ إِسۡمَٰعِيلَۚ إِنَّهُۥ كَانَ صَادِقَ ٱلۡوَعۡدِ وَكَانَ رَسُولٗا نَّبِيّٗا ﴿٥٤﴾

54. Kuna sheeg kitaabka (Nabi) Ismaaciil, wuxuu ahaa rumeeyaha yabooha, wuxuuna ahaa rasuul Nabi ah.

55. Wuxuunna ahaa mid fara ehelkiisa salaadda iyo zakada, wuxuuna ahaa mid Alle agtiisa lagaga raalli yahay.

وَكَانَ يَأۡمُرُ أَهۡلَهُۥ بِٱلصَّلَوٰةِ وَٱلزَّكَوٰةِ وَكَانَ عِندَ رَبِّهِۦ مَرۡضِيًّا ﴿٥٥﴾

56. Kuna sheeg kitaabka (Nabi) Idriis, wuxuu ahaa runbadane Nabi ah.

وَٱذۡكُرۡ فِي ٱلۡكِتَٰبِ إِدۡرِيسَۚ إِنَّهُۥ كَانَ صِدِّيقٗا نَّبِيًّا ﴿٥٦﴾

57. Waxaanna u kor yeellay meel sare.

وَرَفَعۡنَٰهُ مَكَانًا عَلِيًّا ﴿٥٧﴾

58. Kuwaas waa kuwuu u nicmeeyey Alle oo Nabiyadii ah, oo durriyadii Aadam ah, iyo kuwaan xambaarray la jirka (Nabi) Nuux iyo durriyaddi Nabi Ibraahim iyo israa'iil iyo kuwaan hanuuninnay oon doorannay, marka lagu akhriyo korkooda aayaadka Allaha Raxmaan ah way dhacaan iyagoo sujuudi oo ooyi.

أُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ أَنۡعَمَ ٱللَّهُ عَلَيۡهِم مِّنَ ٱلنَّبِيِّـۧنَ مِن ذُرِّيَّةِ ءَادَمَ وَمِمَّنۡ حَمَلۡنَا مَعَ نُوحٖ وَمِن ذُرِّيَّةِ إِبۡرَٰهِيمَ وَإِسۡرَٰٓءِيلَ وَمِمَّنۡ هَدَيۡنَا وَٱجۡتَبَيۡنَآۚ إِذَا تُتۡلَىٰ عَلَيۡهِمۡ ءَايَٰتُ ٱلرَّحۡمَٰنِ خَرُّواْ سُجَّدٗا وَبُكِيًّا ﴿٥٨﴾ ۩

Markuu Nabi Ibraahim isaga tagay aabbihiis iyo qoomkiisii yaa Alle siiyey Isxaaq iyo wiilkiisii Yacquub, Alle na ka yeelay Nabiyo, Alle na u naxariistay magac fiicanna u yeelay, sidoo kale qisada Nabi Muuse iyo walaalkiis Haaruun iyana wax badan yey ku soo aroortay quraanka. Sidoo kale Nabi Ismaaciilkii fari jiray salaadda iyo zakada, iyo Nabi Idiriiskii runta badnaa.

Waana Nabiyada Alle u nicmeeyey marka aayaadka Alle lagu akhriyana sujuuda oo ooya. **[Maryam: 49-58].**

59. Waxaase ka gadaal maray kuwo xun oo dayacay salaadda oo raacay waxay naftoodu doonto (oo xun), waxayna la kulmi shar.

فَخَلَفَ مِنۢ بَعۡدِهِمۡ خَلۡفٌ أَضَاعُواْ ٱلصَّلَوٰةَ وَٱتَّبَعُواْ ٱلشَّهَوَٰتِۖ فَسَوۡفَ يَلۡقَوۡنَ غَيًّا ﴿٥٩﴾

60. Cidda toobad keenta oo rumeysa oo camal fiican fasha mooyee, kuwaasu waxay gali jannada lagamana dulmiyo waxba.

إِلَّا مَن تَابَ وَءَامَنَ وَعَمِلَ صَٰلِحٗا فَأُوْلَٰٓئِكَ يَدۡخُلُونَ ٱلۡجَنَّةَ وَلَا يُظۡلَمُونَ شَيۡـٔٗا ﴿٦٠﴾

61. Jannooyinka cadnin (yey gali) ee ah tuu u yaboohay (Allaha) Raxmaana addoommadiisa, iyagoo maqan, wuuna ahaan yaboohiisu kii yimaadda.

جَنَّٰتِ عَدْنٍ ٱلَّتِى وَعَدَ ٱلرَّحْمَٰنُ عِبَادَهُۥ بِٱلْغَيْبِ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ وَعْدُهُۥ مَأْتِيًّا ﴿٦١﴾

62. Kuma maqlaan dhexdeeda hadal macno darro, ee waxay maqlaan salaam, waxayna ku mudan rizqigooda dhexdeeda aroor iyo galabba.

لَّا يَسْمَعُونَ فِيهَا لَغْوًا إِلَّا سَلَٰمًا ۖ وَلَهُمْ رِزْقُهُمْ فِيهَا بُكْرَةً وَعَشِيًّا ﴿٦٢﴾

63. Taasi waa jannada aannu dhaxalsiin addoommadannada kooda ah mid dhawrsada.

تِلْكَ ٱلْجَنَّةُ ٱلَّتِى نُورِثُ مِنْ عِبَادِنَا مَن كَانَ تَقِيًّا ﴿٦٣﴾

64. Kuma soo dagno amarka Allehaa mooyee, waxaa u sugnaaday waxa horteenna ah, iyo waxa innaga dambeeya iyo waxa u dhexeeya arrintaas, mana aha Allehaa mid halmaansan.

وَمَا نَتَنَزَّلُ إِلَّا بِأَمْرِ رَبِّكَ ۖ لَهُۥ مَا بَيْنَ أَيْدِينَا وَمَا خَلْفَنَا وَمَا بَيْنَ ذَٰلِكَ ۚ وَمَا كَانَ رَبُّكَ نَسِيًّا ﴿٦٤﴾

65. Waa Rabbiga samooyinka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya ee caabud kuna samir cibaadadiisa, ma u ogtahay Alle wax la mid ah, (oo la magaca).

رَّبُّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا فَٱعْبُدْهُ وَٱصْطَبِرْ لِعِبَٰدَتِهِۦ ۚ هَلْ تَعْلَمُ لَهُۥ سَمِيًّا ﴿٦٥﴾

Waxaase ka gadaal maray kuwo xun oo salaadda dayacay, xumaanta raacay, oo la kulmi doona ciqaab daran, ciddiise toobad keenta oo camal fiican fasha waxay gali janno lamana dulmiyo, waxayna mudan jannadii Alle u yaboohay, oy wanaagoo dhan ka heli, xumaanoo dhanna ka dheeraan.

Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: addoonka iyo gaalnimada waxaa u dhaxeeya salaadda oo laga tago (Muslim).

Malaa'igta Alle na waxay uun ugu soo dagi jirtay amarka Alle iyo idankiisa, Alle na waa Rabbiga xaqa ah ee samooyinka iyo dhulka. Wax la mid ahna ama la magac ahna ma jiro. **[Maryam: 59-65].**

66. Wuxuu dhihi dadku (gaalku) ma markaan dhinto yaa laysoo bixin anoo nool.

وَيَقُولُ ٱلْإِنسَٰنُ أَءِذَا مَا مِتُّ لَسَوْفَ أُخْرَجُ حَيًّا ﴿٦٦﴾

67. Miyuuna xusuusanayn dadku annagu inaannu abuurnay horay isagoon waxba ahayn.

أَوَلَا يَذْكُرُ ٱلْإِنسَٰنُ أَنَّا خَلَقْنَٰهُ مِن قَبْلُ وَلَمْ يَكُ شَيْـًٔا ﴿٦٧﴾

68. Rabbigaadaan ku dhaartaye waannu kulmin iyaga iyo shayaadiinta, waxaanna keenaynaa gaararka jahannamo iyagoo fadhiya.

فَوَرَبِّكَ لَنَحْشُرَنَّهُمْ وَٱلشَّيَٰطِينَ ثُمَّ لَنُحْضِرَنَّهُمْ حَوْلَ جَهَنَّمَ جِثِيًّا ﴿٦٨﴾

69. Markaas waxaannu ka siiban koox kasta midkooda ugu daran madax adaygga (gaalnimada iyo caasinta Alle).

ثُمَّ لَنَنزِعَنَّ مِن كُلِّ شِيعَةٍ أَيُّهُمْ أَشَدُّ عَلَى ٱلرَّحْمَٰنِ عِتِيًّا ﴿٦٩﴾

70. Annagaa og kuwa mudnaan badan galidda naarta.

ثُمَّ لَنَحْنُ أَعْلَمُ بِٱلَّذِينَ هُمْ أَوْلَىٰ بِهَا صِلِيًّا ﴿٧٠﴾

71. Cid idinka mid ah oon ku aroorayn ma jiro naarta, arrintaasna waxay ku ahaatay Allehaa wax go'an oo xukuman.

وَإِن مِّنكُمْ إِلَّا وَارِدُهَا ۚ كَانَ عَلَىٰ رَبِّكَ حَتْمًا مَّقْضِيًّا ﴿٧١﴾

72. Markaas waxaannu korin kuwa dhawrsaday, waxaannu kaga tagi daalimiinta dhexdeeda iyagoo jilbo u fadhiya.

ثُمَّ نُنَجِّى ٱلَّذِينَ ٱتَّقَواْ وَّنَذَرُ ٱلظَّٰلِمِينَ فِيهَا جِثِيًّا ﴿٧٢﴾

73. Marka lagu akhriyo korkooda aayaadkannaga oo cad cad waxay u dhihi kuwii gaaloobay kuwa rumeeyey labada kooxood midkee khayr roon nagaadi oo wanaagsan kulan (fadhi).

وَإِذَا تُتْلَىٰ عَلَيْهِمْ ءَايَٰتُنَا بَيِّنَٰتٍ قَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لِلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ أَىُّ ٱلْفَرِيقَيْنِ خَيْرٌ مَّقَامًا وَأَحْسَنُ نَدِيًّا ﴿٧٣﴾

74. Badanaa intaan halaagnay hortood quruun ka fiican xoolo (qalab iyo dhar) iyo aragba.

وَكَمْ أَهْلَكْنَا قَبْلَهُم مِّن قَرْنٍ هُمْ أَحْسَنُ أَثَٰثًا وَرِءْيًا ﴿٧٤﴾

Soo bixinta iyo qiyaamadoo la diido waa caadada gaalada, Alle se waa kan abuuray iyagoon waxba ahayn, soona kulmin gaalada iyo shayaadiinta galinna naarta jahannamo, Alle ayaana og cidda mudan arrintaas, waana la wada mari jidka naarta ee Alle ayaana ka korin kuwa dhawrsaday, kuna daadin daalimiinta oo dullaysan, waana kuwa marka xaqa iyo quraanka lagu akhriyo ugu jawaaba faan iyo wanaag sheegasho. Imisuuse Alle halaagay kuwa xoolo iyo arag wacan. Ibnu Mascuud wuxuu yidhi: waa lagu wada aroori naarta markaasaa cid walbana waxaa lagu soo bixin camalkiisa. Taasina waxay muujin inaan xaalku fududayn, waajibna tahay in la darbado. **[Maryam: 66-74].**

قُلْ مَن كَانَ فِي ٱلضَّلَٰلَةِ فَلْيَمْدُدْ لَهُ ٱلرَّحْمَٰنُ مَدًّا ۚ حَتَّىٰٓ إِذَا رَأَوْا۟ مَا يُوعَدُونَ إِمَّا ٱلْعَذَابَ وَإِمَّا ٱلسَّاعَةَ فَسَيَعْلَمُونَ مَنْ هُوَ شَرٌّ مَّكَانًا وَأَضْعَفُ جُندًا ﴿٧٥﴾

75. Waxaad dhahdaa ciddii baadi ku sugan ha u fidiyo Allaha Raxmaan ah fidin (hana u kaadiyo kaadin), markay arkaan waxaa loogu gooddiyey ama cadaaba ama saacadda (qiyaame) waxay ogaan cidday xumaan badan tahay gurigiisu oo tabaryar junuud (ciidammo).

وَيَزِيدُ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ ٱهْتَدَوْا۟ هُدًى ۗ وَٱلْبَٰقِيَٰتُ ٱلصَّٰلِحَٰتُ خَيْرٌ عِندَ رَبِّكَ ثَوَابًا وَخَيْرٌ مَّرَدًّا ﴿٧٦﴾

76. Wuu u siyaadiyaa Alle kuwa hanuunay hanuun, kuwa hadha ee suubban (camalka) yaa khayr roon Allehaa agtiisa abaal marin khayrna roon meel laysu celiyo.

أَفَرَءَيْتَ ٱلَّذِى كَفَرَ بِـَٔايَٰتِنَا وَقَالَ لَأُوتَيَنَّ مَالًا وَوَلَدًا ﴿٧٧﴾

77. Ka warran midka ka gaaloobay aayaadkannaga oo yidhi waxaa lay siin (aakhiro) xoolo iyo carruur.

أَطَّلَعَ ٱلْغَيْبَ أَمِ ٱتَّخَذَ عِندَ ٱلرَّحْمَٰنِ عَهْدًا ﴿٧٨﴾

78. Ma wuxuu daalacday waxa maqan, mise wuxuu ka yeeshay Allaha Raxmaana agtiisa ballan.

كَلَّا ۚ سَنَكْتُبُ مَا يَقُولُ وَنَمُدُّ لَهُۥ مِنَ ٱلْعَذَابِ مَدًّا ﴿٧٩﴾

79. Saas ma aha ee waannu qori wuxuu sheegi, waxaanna u fidinnaa (kordhinnaa) cadaabka fidin.

80. Waana dhaxlaynaa wuxuu sheegi wuxuuna noo imaan kali.

وَنَرِثُهُۥ مَا يَقُولُ وَيَأۡتِينَا فَرۡدٗا ٨٠

Ciddii baadida iyo xumaanta ku madax adaygta Alle na waa u sii badiyaa, markaasay ogaan qiyaamada cadaab iyo cidda tabaryar, oo xun. Kuwa hanuunayse wuxuu u siyaadiyaa Alle hanuun, camalka fiican yaana hadhi oo wax tari kuna khayr roon Alle agtiisa. Kuwa gaaloobayse ee sheegan in la siin carruur iyo xoolo ma waxay daalacdeen waxa maqan, mise Alle ayay ballan la dhigteen, saas ma aha ee waa la qori waxay sheegi, cadaabna waa loo badin, wuxuuna imaan qiyaamada kali. **[Maryam: 75-80].**

81. Waxay yeesheen Alle ka sokow ilaahyo inay ugu noqdaan cizi (tabar).

وَٱتَّخَذُواْ مِن دُونِ ٱللَّهِ ءَالِهَةٗ لِّيَكُونُواْ لَهُمۡ عِزّٗا ٨١

82. Saas ma aha ee waxay ka gaaloobi cibaadadooda, waxayna ku noqon korkooda lid (col).

كَلَّاۚ سَيَكۡفُرُونَ بِعِبَادَتِهِمۡ وَيَكُونُونَ عَلَيۡهِمۡ ضِدّٗا ٨٢

83. Miyaadan ogayn inaan ku dirro shayaadiinta gaalada oy boorrin (baadiyeyn) baadi.

أَلَمۡ تَرَ أَنَّآ أَرۡسَلۡنَا ٱلشَّيَٰطِينَ عَلَى ٱلۡكَٰفِرِينَ تَؤُزُّهُمۡ أَزّٗا ٨٣

84. Ee ha ku degdegin korkooda, waannu uun u tirin tiree.

فَلَا تَعۡجَلۡ عَلَيۡهِمۡۖ إِنَّمَا نَعُدُّ لَهُمۡ عَدّٗا ٨٤

85. Xusuuso maalintaan u kulmineyno kuwa dhawrsaday Allaha Raxmaana iyagoo wafdi ah.

يَوۡمَ نَحۡشُرُ ٱلۡمُتَّقِينَ إِلَى ٱلرَّحۡمَٰنِ وَفۡدٗا ٨٥

86. Oon u kaxaynayno dambiilayaasha xagga jahannamo iyagoo aroora.

وَنَسُوقُ ٱلۡمُجۡرِمِينَ إِلَىٰ جَهَنَّمَ وِرۡدٗا ٨٦

87. Mana hantaan shafeeco cid ka yeelata Allaha Raxmaana agtiisa ballan mooyee.

لَّا يَمۡلِكُونَ ٱلشَّفَٰعَةَ إِلَّا مَنِ ٱتَّخَذَ عِندَ ٱلرَّحۡمَٰنِ عَهۡدٗا ٨٧

88. Waxay dheheen (gaaladu) wuxuu yeeshay Allaha Raxmaana ilmo.

وَقَالُواْ ٱتَّخَذَ ٱلرَّحۡمَٰنُ وَلَدٗا ٨٨

89. Waxaad la timaadeen wax wayn.

لَّقَدْ جِئْتُمْ شَيْـًٔا إِدًّا ﴿٨٩﴾

90. Oy u dhawdahay samooyinku inay la dillacaan lana jeexmo dhulku oy la hoobato buuruhu burbur.

تَكَادُ ٱلسَّمَٰوَٰتُ يَتَفَطَّرْنَ مِنْهُ وَتَنشَقُّ ٱلْأَرْضُ وَتَخِرُّ ٱلْجِبَالُ هَدًّا ﴿٩٠﴾

91. Inay u sheegeen Allaha Raxmaana ilmo.

أَن دَعَوْا۟ لِلرَّحْمَٰنِ وَلَدًا ﴿٩١﴾

92. Kuma habboona Allaha Raxmaana inuu yeesho ilmo.

وَمَا يَنۢبَغِى لِلرَّحْمَٰنِ أَن يَتَّخِذَ وَلَدًا ﴿٩٢﴾

Wuxuu ka warrami Alle inay gaaladu yeesheen ilaahyo Alle ka soo hadhay inay cisse iyo gargaar ka helaan, saasna ma aha ee way diidi doonaan qiyaamada colla way u noqon. Shaydaan iyo gaalla waa saaxiib ku kicin xumaanta, ee samir wax walba wuxuu leeyahay waqtiye.

Tan kale maalinta qiyaame wuxuu Alle soo kulmin kuwa dhawrsada iyagoo wafdi sharaf leh ah, dambiilayaashana waxaa loo kaxayn xagga jahannamo iyagoo aroori, wax Alle ka soo hadhay oo shafeeco hantana ma jiro cid ballan ku yeelatay Alle agtiisa mooyee, Alle na ilmo ma yeelan, warkaasina waa arrin wayn oy u dhawdahay in cirku iyo dhulku la dillaaco, buuruhuna la burburi gaadhaan, illeen Alle ayay ilmo u sheegeene, taasina kama suurowdo Alle. Cali binu Abii Dhaalib wuxuu yidhi: kuwa dhawrsada waxaa la soo kulmin iyagoo gaadiid fiican saaran, intay ka garaacaan albaabka jannada. **[Maryam: 81-92].**

93. Wax kastoo samada iyo dhulka ku sugan wuxuu u imaan Alle isagoo addoona.

إِن كُلُّ مَن فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ إِلَّآ ءَاتِى ٱلرَّحْمَٰنِ عَبْدًا ﴿٩٣﴾

94. Wuu koobay Alle wuuna tiriyey tiro.

لَّقَدْ أَحْصَىٰهُمْ وَعَدَّهُمْ عَدًّا ﴿٩٤﴾

95. Dhammaantoodna waxay u imaan Alle qiyaamada iyagoo kali ah.

وَكُلُّهُمْ ءَاتِيهِ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ فَرْدًا ﴿٩٥﴾

96. Kuwa xaqa rumeeyey ee camal fiican falay wuxuu u yeeli Allaha Raxmaana jacayl.

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ سَيَجْعَلُ لَهُمُ ٱلرَّحْمَٰنُ وُدًّا ﴿٩٦﴾

فَإِنَّمَا يَسَّرْنَٰهُ بِلِسَانِكَ لِتُبَشِّرَ بِهِ ٱلْمُتَّقِينَ وَتُنذِرَ بِهِۦ قَوْمًا لُّدًّا ﴿٩٧﴾

97. Waxaan uun ugu fududaynay quraanka carrabkaaga inaad ugu bishaarayso quraanka kuwa dhawrsada uguna digtid qoom dood badan (oo xun).

وَكَمْ أَهْلَكْنَا قَبْلَهُم مِّن قَرْنٍ هَلْ تُحِسُّ مِنْهُم مِّنْ أَحَدٍ أَوْ تَسْمَعُ لَهُمْ رِكْزًا ﴿٩٨﴾

98. Badanaa intaan halaagnay hortood qarni, ma ka kasaysaa xaggooda (aragtaa) ruuxna, ama ma ka maqli xaggooda cod.

Cirka iyo dhulka iyo waxa u dhexeeyaba waxa ku sugan Alle ayaa iska leh, oyna cid walbaa u imaan qiyaamada iyadoo kaligeeda. Alle na waa koobay khalqiga waana u tirsan yahay, ciddii xaqa rumeysa wanaagna sameysa wuxuu Alle u yeeli jacayl. Siduu Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) sheegay: in markuu Alle jeclaado ruux uu faro Jabriil inuu jeclaado markaasuu jabriil u dhawaaqaa ehelka samada inay jeclaadaan, markaasaa dhulkana aqbal loogu yeelaa, cadhaduna waa sidaas. Quraankana Alle ayaa u sahlay carrabka si loogu bishaareeyo kuwa dhawrsada, uguna digo gaalo madax adag oo muran badan. Wax badan baana la halaagay quruumo ka horreeyey, wax raadana aan laga arkayn wax shanqadhana aan laga maqlayn.

Cismaan binu Cafaan wuxuu yidhi (Alle ha ka raalli noqdee): ruux kastoo khayr fala ama shar fala wuxuu Alle huwiyaa marada camalkiisa. **[Maryam: 93-98].**

Suurat Dhaahaa

سُورَةُ طٰهٰ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Xarafyadan kuwo la mid ah waa la soo sheegay.

طه ﴿١﴾

2. Maanaan dejin korkaaga quraanka inaad ku dhibbooto.

مَآ أَنزَلْنَا عَلَيْكَ ٱلْقُرْءَانَ لِتَشْقَىٰٓ ﴿٢﴾

3. Waase waanada ciddii cabsan.

إِلَّا تَذْكِرَةً لِّمَن يَخْشَىٰ ﴿٣﴾

4. Waana soo dejinta Allaha abuuray dhulka iyo samooyinka sare.

تَنزِيلًا مِّمَّنْ خَلَقَ ٱلْأَرْضَ وَٱلسَّمَٰوَٰتِ ٱلْعُلَى ﴿٤﴾

5. Allaha Raxmaana carshiguu ka kor noqday (si u cunanta).

ٱلرَّحْمَٰنُ عَلَى ٱلْعَرْشِ ٱسْتَوَىٰ ﴿٥﴾

6. Waxaana u sugnaaday waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan iyo waxa u dhaxeeya iyo waxa ka hooseeya dhulka.

لَهُۥ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِى ٱلْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا وَمَا تَحْتَ ٱلثَّرَىٰ ﴿٦﴾

7. Haddaad kor u qaaddo hadalka Alle waa og yahay waxa qarsoon iyo waxa la qariyey.

وَإِن تَجْهَرْ بِٱلْقَوْلِ فَإِنَّهُۥ يَعْلَمُ ٱلسِّرَّ وَأَخْفَى ﴿٧﴾

8. Alle ilaah xaq lugu caabudo ma jiro isaga mooyee, waxaana u sugnaaday magacyo fiican.

ٱللَّهُ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ۖ لَهُ ٱلْأَسْمَآءُ ٱلْحُسْنَىٰ ﴿٨﴾

9. Ma ku soo gaadhay warkii (Nabi) Muuse.

وَهَلْ أَتَىٰكَ حَدِيثُ مُوسَىٰٓ ﴿٩﴾

10. Markuu arkay dab oo u yidhi ehelkiisa nagaada (suga) anigu waxaan arkaa dabe, waxaana u dhawahay inaan idiinka keeno dhuxul ama aan ka helo dabka korkiisa cid wax tusisa.

إِذْ رَءَا نَارًا فَقَالَ لِأَهْلِهِ ٱمْكُثُوٓا۟ إِنِّىٓ ءَانَسْتُ نَارًا لَّعَلِّىٓ ءَاتِيكُم مِّنْهَا بِقَبَسٍ أَوْ أَجِدُ عَلَى ٱلنَّارِ هُدًى ﴿١٠﴾

Quraanka Alle uguma soo degin Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu ku dhibtamo siday gaaladii sheegeen ee quraanku waa digniin iyo soo dejin Alleha sare ee awoodda leh, wax walbana hanta, wax walbana og kor iyo hoosba, ilaah xaq lugu caabudo ma jiro isaga mooyee, magacyo fiican baana u sugnaaday. Qisadii Nabi Muuse iyo iftiinkuu arkay iyo siduu xaalkiisu ahaana wax badan yuu quraanku ka warramay, si Nabiga loo xoojiyo, loona samirsiiyo. Quraankuna waa khayr iyo wanaag iyo naxariis, waxaana ku dadaala cid khayr leh. Waxaana sugnaatay: ruuxuu Alle khayr la doono wuxuu kasisiiyaa diinta. Waxaa wariyey (Bukhaari iyo Muslim). **[Dhaahaa: 1-10].**

11. Markuu yimid (muuse) dabkii waxa loogu dhawaaqay muusow.

فَلَمَّآ أَتَىٰهَا نُودِىَ يَٰمُوسَىٰٓ ﴿١١﴾

12. Anigu waxan ahay Allehaa ee siib kabahaaga adigu waxaad ku sugan tahay toggii daahirnaa ee Dhuwa.

إِنِّىٓ أَنَا۠ رَبُّكَ فَٱخْلَعْ نَعْلَيْكَ إِنَّكَ بِٱلْوَادِ ٱلْمُقَدَّسِ طُوًى ﴿١٢﴾

13. Anaana ku doortay ee maqal waxa laguu waxyoon.

وَأَنَا ٱخْتَرْتُكَ فَٱسْتَمِعْ لِمَا يُوحَىٰٓ ﴿١٣﴾

14. Anigu waxaan ahay Alle ilaah xaq lugu caabudo ma jiro ani mooyee, ina caabud, oogna salaadda xuskayga (dartii).

إِنَّنِىٓ أَنَا ٱللَّهُ لَآ إِلَٰهَ إِلَّآ أَنَا۠ فَٱعْبُدْنِى وَأَقِمِ ٱلصَّلَوٰةَ لِذِكْرِىٓ ﴿١٤﴾

15. Saacadda (qiyaame) way imaan waxaanan u dhawahay inaan qariyo in laga abaal mariyo naf kasta waxay camal fashay.

إِنَّ ٱلسَّاعَةَ ءَاتِيَةٌ أَكَادُ أُخْفِيهَا لِتُجْزَىٰ كُلُّ نَفْسٍۭ بِمَا تَسْعَىٰ ﴿١٥﴾

16. Ee yuusan kaa iilin xaggeeda ruuxaan rumeyn saacadda, raacayna hawadiisa (xun) ood halaagsanto.

فَلَا يَصُدَّنَّكَ عَنْهَا مَن لَّا يُؤْمِنُ بِهَا وَٱتَّبَعَ هَوَىٰهُ فَتَرْدَىٰ ﴿١٦﴾

17. Waa maxay taas midigtaada ku jirta Muusow (ogaal waydiin).

وَمَا تِلْكَ بِيَمِينِكَ يَٰمُوسَىٰ ﴿١٧﴾

18. Wuxuu yidhi iyadu waa ushaydii waa cuskadaa korkeeda waxna waan ugu lulaa adhigayga, dana kalana waa iigu sugnaadeen.

قَالَ هِيَ عَصَايَ أَتَوَكَّؤُا۟ عَلَيْهَا وَأَهُشُّ بِهَا عَلَىٰ غَنَمِي وَلِيَ فِيهَا مَـَٔارِبُ أُخْرَىٰ ﴿١٨﴾

19. Wuxuu yidhi (Alle) tuur usha Muusow.

قَالَ أَلْقِهَا يَٰمُوسَىٰ ﴿١٩﴾

20. Wuuna tuuray waxayna soo baxday mas ordi.

فَأَلْقَىٰهَا فَإِذَا هِيَ حَيَّةٌ تَسْعَىٰ ﴿٢٠﴾

21. Wuxuuna yidhi (Alle) qaad hana cabsannin waxaannu ku celin xaalkeedii horee.

قَالَ خُذْهَا وَلَا تَخَفْ ۖ سَنُعِيدُهَا سِيرَتَهَا ٱلْأُولَىٰ ﴿٢١﴾

Markuu Nabi Muuse soo gaadhay nuurkii yaa la faray inuu siibo kabaha illeen toggii daahirka ahaa yuu ku sugan yahaye ee dhuwa. Alle na wuu doortay Nabi Muuse waxaana loo waxyooday inaan ilaahay mooyee Alle kale oo xaq lagu caabudaa jirin iyo in uu salaadda dar Alle u oogo. Saacadduna way iman shaki la'aan, naf walbana waa la abaal marin ee yaanay jidka toosan kaa leexinnin cidaan rumeynin oo raacay xumaan oo halaagsamay. Markaasaa Alle ka warramay ushii Nabi Muuse iyo xaalkeedii sida meela badan lagu sheegay, taasina waxay ku tusin awoodda Alle. **[Dhaahaa: 11-21].**

22. U dum gacantaada garabkaaga waxay soo bixi iyadoo cad xumaan la'aan, waana calaamad kale.

وَٱضْمُمْ يَدَكَ إِلَىٰ جَنَاحِكَ تَخْرُجْ بَيْضَآءَ مِنْ غَيْرِ سُوٓءٍ ءَايَةً أُخْرَىٰ ﴿٢٢﴾

23. Inaan ku tusinno aayaadkannaga weyn.

لِنُرِيَكَ مِنْ ءَايَـٰتِنَا ٱلْكُبْرَى ﴿٢٣﴾

24. Ee aad xagga Fircoon wuu xadgudbaye (kibray).

ٱذْهَبْ إِلَىٰ فِرْعَوْنَ إِنَّهُۥ طَغَىٰ ﴿٢٤﴾

25. Wuxuu yidhi (Muuse) Allow ii waasici laabta.

قَالَ رَبِّ ٱشْرَحْ لِى صَدْرِى ﴿٢٥﴾

26. Iina sahal (fududee) amarkayga.

وَيَسِّرْ لِىٓ أَمْرِى ﴿٢٦﴾

27. Furna guntinta carrabkayga.

وَٱحْلُلْ عُقْدَةً مِّن لِّسَانِى ﴿٢٧﴾

28. Ha kaseen hadalkeygee.
يَفْقَهُواْ قَوْلِي ﴿٢٨﴾

29. Iina yeel wasiir ehelkeyga ah.
وَٱجْعَل لِّي وَزِيرًا مِّنْ أَهْلِي ﴿٢٩﴾

30. Haaruun walaalkay.
هَٰرُونَ أَخِي ﴿٣٠﴾

31. Kuna adkee «xooji» tabartayda (dhabarkayga).
ٱشْدُدْ بِهِۦٓ أَزْرِي ﴿٣١﴾

32. Lana wadaaji amarkayga.
وَأَشْرِكْهُ فِيٓ أَمْرِي ﴿٣٢﴾

33. Inaan kugu tasbiixsanno wax badan.
كَيْ نُسَبِّحَكَ كَثِيرًا ﴿٣٣﴾

34. Oon ku xusno wax badan.
وَنَذْكُرَكَ كَثِيرًا ﴿٣٤﴾

35. Adugu waxaad tahay mid na arkee.
إِنَّكَ كُنتَ بِنَا بَصِيرًا ﴿٣٥﴾

36. Wuxuu yidhi (Alle): waa lagu siiyey warsigaagii Muusow.
قَالَ قَدْ أُوتِيتَ سُؤْلَكَ يَٰمُوسَىٰ ﴿٣٦﴾

37. Waana kugu mannaysannay wanaag (ku siinnay) korkaaga mar kale.
وَلَقَدْ مَنَنَّا عَلَيْكَ مَرَّةً أُخْرَىٰٓ ﴿٣٧﴾

38. Markaan u waxyoonnay hooyadaa (ku ilhaamay) wixii lagu ilhaameeyey.
إِذْ أَوْحَيْنَآ إِلَىٰٓ أُمِّكَ مَا يُوحَىٰٓ ﴿٣٨﴾

39. Ku tuur Muuse sanduuq, kuna tuur taabuudka badda dhexdeeda, badduna ha ku riddo xeebta, waxaa qaadan colkayga iyo colkiisa (Fircoon), waxaana kugu tuuray jeceylkeyga korkaaga iyo in lagu barbaariyo ilaalintayda.
أَنِ ٱقْذِفِيهِ فِي ٱلتَّابُوتِ فَٱقْذِفِيهِ فِي ٱلْيَمِّ
فَلْيُلْقِهِ ٱلْيَمُّ بِٱلسَّاحِلِ يَأْخُذْهُ عَدُوٌّ لِّي
وَعَدُوٌّ لَّهُۥ ۚ وَأَلْقَيْتُ عَلَيْكَ مَحَبَّةً مِّنِّي
وَلِتُصْنَعَ عَلَىٰ عَيْنِيٓ ﴿٣٩﴾

Aayadahani waxay ka warrami sida Alle u xoojiyey Nabi Muuse una siiyey gacan nuura cudur la'aan, una faray inuu aado fircoon una digo, una waasiciyey laabtiisa, amarkiisana u fududeeyey, carrabkiisana u wanaajiyey si ay u kasaan

hadalkiisa, walaalkiis Haaruunna Nabi wasiir ah ka dhigay, inay Alle u wada caabudaan, iyo in Alle ka aqbalay Nabi Muuse baryada Alle, una wanaag falay yaraantiisii markuu ka nabadgaliyey colkiisii Fircoon, hooyadiina ku celiyey. Taasina waxay ku tusin sida Alle u ajiibay baryada mu'miniinta, iyo in xaqu guusha yeelan iyo in wanaagga laysla doono. **[Dhaahaa: 22-39].**

إِذْ تَمْشِيٓ أُخْتُكَ فَتَقُولُ هَلْ أَدُلُّكُمْ عَلَىٰ مَن يَكْفُلُهُۥ ۖ فَرَجَعْنَٰكَ إِلَىٰٓ أُمِّكَ كَىْ تَقَرَّ عَيْنُهَا وَلَا تَحْزَنَ ۚ وَقَتَلْتَ نَفْسًا فَنَجَّيْنَٰكَ مِنَ ٱلْغَمِّ وَفَتَنَّٰكَ فُتُونًا ۚ فَلَبِثْتَ سِنِينَ فِىٓ أَهْلِ مَدْيَنَ ثُمَّ جِئْتَ عَلَىٰ قَدَرٍ يَٰمُوسَىٰ ﴿٤٠﴾

40. (Waxaan kugu mannaysanay) markay socotay walaashaa oy lahayd maydin tusiyaa ruux idiin dhaqaalayn waxaanna kugu celinnay hooyadaa si ay u qabowdo isheedu, oyna murugoon, waxaadna dishay naf waana kaa korinnay walbahaar, waana ku imtixaannay imtixaan, waxaadna ku nagaatay sanooyin ehelkii madyan, markaasaad ku timid qaddar (Alle) Muusow.

وَٱصْطَنَعْتُكَ لِنَفْسِى ﴿٤١﴾

41. Waxaana kuu doortay naftayda.

ٱذْهَبْ أَنتَ وَأَخُوكَ بِـَٔايَٰتِى وَلَا تَنِيَا فِى ذِكْرِى ﴿٤٢﴾

42. Ee la taga adiga iyo walaalkaa aayaadkayga hana ka daalina xuskayga.

ٱذْهَبَآ إِلَىٰ فِرْعَوْنَ إِنَّهُۥ طَغَىٰ ﴿٤٣﴾

43. Aada xagga fircoon wuu xadgudbaye.

فَقُولَا لَهُۥ قَوْلًا لَّيِّنًا لَّعَلَّهُۥ يَتَذَكَّرُ أَوْ يَخْشَىٰ ﴿٤٤﴾

44. Una dhaha hadal jilicsan bal inuu wax xusuusto ama cabsado.

قَالَا رَبَّنَآ إِنَّنَا نَخَافُ أَن يَفْرُطَ عَلَيْنَآ أَوْ أَن يَطْغَىٰ ﴿٤٥﴾

45. Waxay dheheen Allow waxaannu ka cabsan inuu nagu degdego ama nagu xadgudbo.

قَالَ لَا تَخَافَآ ۖ إِنَّنِى مَعَكُمَآ أَسْمَعُ وَأَرَىٰ ﴿٤٦﴾

46. Wuxuu yidhi (Alle) ha cabsannina anaa idinla jira waana maqli oon arkaa.

فَأْتِيَاهُ فَقُولَآ إِنَّا رَسُولَا رَبِّكَ فَأَرْسِلْ

47. Ee u taga (Fircoon) una dhaha annagu waxaan nahay

مَعَنَا بَنِيٓ إِسۡرَٰٓءِيلَ وَلَا تُعَذِّبۡهُمۡۖ قَدۡ جِئۡنَٰكَ بِـَٔايَةٖ مِّن رَّبِّكَۖ وَٱلسَّلَٰمُ عَلَىٰ مَنِ ٱتَّبَعَ ٱلۡهُدَىٰٓ ٤٧

rasuulladii Allehaa ee dir (u daa) banii israa'iil hanala jireene, hana cadaabin (ciqaabin), waxaan kuula nimid aayad xagga Allehaa, nabadgalyana ha ahaato dusha ruuxii raaca hanuunka.

Aayadahanna waxay daba joogaan kuwii hore, waxayna ka warrami sida Alle u nabadgaliyey Nabi Muuse una doortay, uguna diray fircoon, una faray inay hadal jilicsan kula hadlaan, cabsi iyo xumaanna ayna ka yaabin, oy warsadaan inuu ka tago banii israa'iil ha raaceen xaqee oosan addoonsan. Waxayna tusin in xaqa dadka si cad iyo fudud loogu yeedho oon canaan iyo caytan lahayn, sida Alle faray Nabi Muuse, Nabiga Muxamed ahna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) uu faray falayna sida ka muuqata warqadduu u qoray Hiriqlihii Ruum, oo ahaa islaam aad nabad gashid, Alle na ha ku siiyo ajirkaaga laba jeere. Waana taas aadaabta islaamku. **[Dhaahaa: 40-47].**

إِنَّا قَدۡ أُوحِيَ إِلَيۡنَآ أَنَّ ٱلۡعَذَابَ عَلَىٰ مَن كَذَّبَ وَتَوَلَّىٰ ٤٨

48. Annaga waxaa naloo waxyooday in cadaab u sugnaaday ruuxii beeniya (xaqa) oo jeedsada.

قَالَ فَمَن رَّبُّكُمَا يَٰمُوسَىٰ ٤٩

49. Wuxuu yidhi (Fircoon): waayo Allihiin Muusow.

قَالَ رَبُّنَا ٱلَّذِيٓ أَعۡطَىٰ كُلَّ شَيۡءٍ خَلۡقَهُۥ ثُمَّ هَدَىٰ ٥٠

50. Wuxuu yidhi (Muuse): Rabbiganno waa kan siiya wax kasta abuurkiisa oo toosiyey.

قَالَ فَمَا بَالُ ٱلۡقُرُونِ ٱلۡأُولَىٰ ٥١

51. Wuxuu yidhi (Fircoon): sidee yahay xaalkii quruumihii hore.

قَالَ عِلۡمُهَا عِندَ رَبِّي فِي كِتَٰبٖۖ لَّا يَضِلُّ رَبِّي وَلَا يَنسَى ٥٢

52. Wuxuu yidhi (Muuse): cilmigoodu waa Alle agtiis kitaab dhexdiis, ma gefo Alle mana halmaamo.

ٱلَّذِي جَعَلَ لَكُمُ ٱلۡأَرۡضَ مَهۡدٗا وَسَلَكَ لَكُمۡ فِيهَا سُبُلٗا وَأَنزَلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءٗ فَأَخۡرَجۡنَا بِهِۦٓ أَزۡوَٰجٗا مِّن نَّبَاتٖ شَتَّىٰ ٥٣

53. Waa Allaha ka yeelay dhulka gogol, oo idiinka bixiyey dhexdeeda waddooyin oo idiinka soo dejiyey samada biyo oon ku soo bixinnay noocyo doog ah oo kala tagsan.

كُلُوا۟ وَٱرْعَوْا۟ أَنْعَـٰمَكُمْ ۗ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَـَٔايَـٰتٍ لِّأُو۟لِى ٱلنُّهَىٰ ﴿٥٤﴾

54. Ee cuna oo daajiya xoolihiinna, arrintaasna calaamooyin yaa ugu sugan kuwa caqliga leh.

* مِنْهَا خَلَقْنَـٰكُمْ وَفِيهَا نُعِيدُكُمْ وَمِنْهَا نُخْرِجُكُمْ تَارَةً أُخْرَىٰ ﴿٥٥﴾

55. Xaggeedaan (dhulka) idinka abuurnay, dhexdeedanna idinku celin, xaggeedaanna laydinka soo bixin mar kale.

وَلَقَدْ أَرَيْنَـٰهُ ءَايَـٰتِنَا كُلَّهَا فَكَذَّبَ وَأَبَىٰ ﴿٥٦﴾

56. Waxaan dhab ahaan u tusinnay (Fircoon) aayaadkannaga dhammaan, wuuna beeniyey oo diiday.

Markuu Nabi Muuse xaqa u caddeeyey Fircoon uguna yeedhay, ugana digay ciqaab yuu isla weynaaday warsadayna Alleha Muuse isagoo ismoogaysiin caqli xumo darteed, wuxuuse u caddeeyey Nabi Muuse in Alle yahay kan tusiya wax kastoos abuuray maslaxadiisa, mid dayaca ama halmaamana ahayn, waana kan dhulka gogol ka yeelay, waddooyinna ka bixiyey, cirkana biyo ka keenay, kuna soo bixiya cunno kala duwan, oo calaamad u ah kuwa caqliga leh, waana Rabbiga dadka dhulka ka abuuray, kuna celin, kana soo bixin qiyaamada. Daalimse had iyo jeer xaquu diidaa sidii Fircoonkii si walba wax loo tusiyey ee beeniyey xaqa diidayna. Ciddii caqli lehse waa inay fikirtaa kana leexataa waddadii Fircoon iyo waxa la mid ah. **[Dhaahaa: 48-56].**

قَالَ أَجِئْتَنَا لِتُخْرِجَنَا مِنْ أَرْضِنَا بِسِحْرِكَ يَـٰمُوسَىٰ ﴿٥٧﴾

57. Wuxuu yidhi (Fircoon): ma waxaad noola timid inaad nagaga bixiso dhulkannaga sixirkaaga muusow.

فَلَنَأْتِيَنَّكَ بِسِحْرٍ مِّثْلِهِۦ فَٱجْعَلْ بَيْنَنَا وَبَيْنَكَ مَوْعِدًا لَّا نُخْلِفُهُۥ نَحْنُ وَلَآ أَنتَ مَكَانًا سُوًى ﴿٥٨﴾

58. Waxaannu kuula imaanaynaa sixir la mid ah ee noo yeel dhexdeenna ballan aynaan baajinayn annaga iyo adigu, meel eg (la yaqaan).

قَالَ مَوْعِدُكُمْ يَوْمُ ٱلزِّينَةِ وَأَن يُحْشَرَ ٱلنَّاسُ ضُحًى ﴿٥٩﴾

59. Wuxuu yidhi (Nabi Muuse) ballanteennu waa maalinta quruxda (kulankooda) waana in la soo kulmiyo dadka barqin.

فَتَوَلَّىٰ فِرْعَوْنُ فَجَمَعَ كَيْدَهُۥ ثُمَّ أَتَىٰ ﴿٦٠﴾

60. Wuuna jeedsaday Fircoon wuxuuna kulmiyey dhagartiisii wuuna yimid.

قَالَ لَهُم مُّوسَىٰ وَيۡلَكُمۡ لَا تَفۡتَرُواْ عَلَى ٱللَّهِ كَذِبٗا فَيُسۡحِتَكُم بِعَذَابٖۖ وَقَدۡ خَابَ مَنِ ٱفۡتَرَىٰ ٦١

61. Wuxuu ku yidhi Muuse magaciin be'e ha ku abuurannina Alle korkiisa been oos idinku halaago cadaab waxaana khasaaray ruuxii been abuurta.

فَتَنَٰزَعُوٓاْ أَمۡرَهُم بَيۡنَهُمۡ وَأَسَرُّواْ ٱلنَّجۡوَىٰ ٦٢

62. Waxayna ku doodeen amarkooda dhexdooda wayna faqeen.

قَالُوٓاْ إِنۡ هَٰذَٰنِ لَسَٰحِرَٰنِ يُرِيدَانِ أَن يُخۡرِجَاكُم مِّنۡ أَرۡضِكُم بِسِحۡرِهِمَا وَيَذۡهَبَا بِطَرِيقَتِكُمُ ٱلۡمُثۡلَىٰ ٦٣

63. Waxayna dheheen labadani waa saaxirro waxayna dooni inay idinkaga bixiyaan dhulkiinna sixirkooda oy la tagaan dariiqadiinna (sharaftiinna) fiican.

فَأَجۡمِعُواْ كَيۡدَكُمۡ ثُمَّ ٱئۡتُواْ صَفّٗاۚ وَقَدۡ أَفۡلَحَ ٱلۡيَوۡمَ مَنِ ٱسۡتَعۡلَىٰ ٦٤

64. Ee kulmiya dhagartiinna imaadana idinkoo saf ah, waxaa liibaanay maanta ciddii sarreysee.

Wali waxaa socda qisadii Nabi Muuse iyo daalimkii Fircoon ahaa, meelo badan yeyna quraanka kaga soo aroortay, inkastoo mid walba micna gaara tusin, halkanna wuxuu sheegay in Nabi Muuse dooni inuu kaga bixiyo dhulka sixir, wuxuuna kulmiyey sixiroolayaalkii waqtina waa la mudaystay, hase yeeshee Nabi Muuse wuu waaniyey dadkaas wuxuuna uga digay xumaanta. Taasina waxay ku tusin in had iyo jeer xaqa la faro, inkastoo Fircoon kiciyey dadkii guubaabiyeyna, isagoo ku beer jileecsan Nabi Muuse inuu rabo, sharaftooda iyo dawladnimadooda in uu qaato, dhulka Masarra dooni inuu isagu u hadho, taasina waa afka xumaanlow, ee waxaa dhab ah inuu Nabi Muuse iyo mu'miniintuba ay rabaan wanaag, nabadgalyo iyo in xaqu sarreeyo, xumaantuna dhammaato. **[Dhaahaa: 57-64].**

قَالُواْ يَٰمُوسَىٰٓ إِمَّآ أَن تُلۡقِيَ وَإِمَّآ أَن نَّكُونَ أَوَّلَ مَنۡ أَلۡقَىٰ ٦٥

65. Waxay dheheen Muusow ama tuur usha ama aan anagu ahaanno kuwa hor tuura.

قَالَ بَلۡ أَلۡقُواْۖ فَإِذَا حِبَالُهُمۡ وَعِصِيُّهُمۡ يُخَيَّلُ إِلَيۡهِ مِن سِحۡرِهِمۡ أَنَّهَا تَسۡعَىٰ ٦٦

66. Wuxuu yidhi (Muuse): bal tuura, waxaana soo baxay xadhkahoodii iyo ulahoodii oo loogu ekeysiiyey sixirkoodii inay ordi.

فَأَوْجَسَ فِي نَفْسِهِۦ خِيفَةً مُّوسَىٰ ﴿٦٧﴾

67. Wuxuuna ka kasay naftiisa cabsi Muuse.

قُلْنَا لَا تَخَفْ إِنَّكَ أَنتَ ٱلْأَعْلَىٰ ﴿٦٨﴾

68. Waxaana nidhi ha cabsan adigu adaa sarreyne.

وَأَلْقِ مَا فِي يَمِينِكَ تَلْقَفْ مَا صَنَعُوٓاْ ۖ إِنَّمَا صَنَعُواْ كَيْدُ سَٰحِرٍ ۖ وَلَا يُفْلِحُ ٱلسَّاحِرُ حَيْثُ أَتَىٰ ﴿٦٩﴾

69. Tuur waxa midigtaada ku jira ha gurato waxay sameeyeene, waxay uun sameeyeen dhagar sixir, mana liibaano sixirrow meeshuu yimaaddo.

فَأُلْقِيَ ٱلسَّحَرَةُ سُجَّدًا قَالُوٓاْ ءَامَنَّا بِرَبِّ هَٰرُونَ وَمُوسَىٰ ﴿٧٠﴾

70. Waxaa la riday saaxiriintii iyagoo sujuudi, waxayna dheheen waxaan rumeynay Rabbiga Haaruun iyo Muuse.

قَالَ ءَامَنتُمْ لَهُۥ قَبْلَ أَنْ ءَاذَنَ لَكُمْ ۖ إِنَّهُۥ لَكَبِيرُكُمُ ٱلَّذِي عَلَّمَكُمُ ٱلسِّحْرَ ۖ فَلَأُقَطِّعَنَّ أَيْدِيَكُمْ وَأَرْجُلَكُم مِّنْ خِلَٰفٍ وَلَأُصَلِّبَنَّكُمْ فِي جُذُوعِ ٱلنَّخْلِ وَلَتَعْلَمُنَّ أَيُّنَآ أَشَدُّ عَذَابًا وَأَبْقَىٰ ﴿٧١﴾

71. Wuxuuna yidhi (Fircoon): miyaad u rumeyseen ka hor idankayga isagu waa kan idinku wayn ee idin baray sixirka, waxaan goyn gacmihiinna iyo lugihiinna si isdhaaf ah waxaana idinku (daldali) wadhi jirrid timir, waxaadna ogaanaysaan midkannaga daran cadaab, hadhidna badan yahay cadaabkiisu (khilaafka la khilaafay dartii.

قَالُواْ لَن نُّؤْثِرَكَ عَلَىٰ مَا جَآءَنَا مِنَ ٱلْبَيِّنَٰتِ وَٱلَّذِي فَطَرَنَا ۖ فَٱقْضِ مَآ أَنتَ قَاضٍ ۖ إِنَّمَا تَقْضِي هَٰذِهِ ٱلْحَيَوٰةَ ٱلدُّنْيَآ ﴿٧٢﴾

72. Waxay dhaheen kaa dooran meyno waxa noo yimid oo xujo ah iyo Rabbiga na abuuray, ee xukmi waxaad xukumi, waxaad uun xukumi nolosha adduunyo.

إِنَّآ ءَامَنَّا بِرَبِّنَا لِيَغْفِرَ لَنَا خَطَٰيَٰنَا وَمَآ أَكْرَهْتَنَا عَلَيْهِ مِنَ ٱلسِّحْرِ ۗ وَٱللَّهُ خَيْرٌ وَأَبْقَىٰٓ ﴿٧٣﴾

73. Annagu waxaan rumeeynay Rabbigeen si uu noogu dhaafo gafafkannaga iyo waxaad nagu qasabtay (Fircoonow) oo sixira,

Alle ayaa khayr roon (xagga abaalmarin ta qofkii adeeca) oo uu hadhi oo yahay cadaabkiisu (haddii la khilaafo).

Dadkii Fircoon ku soo kulmiyey inay kala hortagaan Nabi Muuse sixir waxay arrintii noqotay in laga adkaaday waxay dhoob dhoobeen waxna tarin, markaas rumeeyeen xaqii fircoonna ciqaabay, umase aabayeelin mar hadday arkeen xaqii, waana kaas xaq iyo xumaan, cidhibta fiican iyo sharaftiina xaqaa yeeshay, dulli iyo dhibaato Fircoon iyo qoomkisii yey ku hadhay. **[Dhaahaa: 65-73].**

إِنَّهُۥ مَن يَأۡتِ رَبَّهُۥ مُجۡرِمٗا فَإِنَّ لَهُۥ جَهَنَّمَ لَا يَمُوتُ فِيهَا وَلَا يَحۡيَىٰ ٧٤

74. Ruuxii u yimaadda Allehiis (aakharo) isagoo dambiile ah waxaa u sugnaaday jahannamo kumana dhinto dhexdeeda kumana noolaado.

وَمَن يَأۡتِهِۦ مُؤۡمِنٗا قَدۡ عَمِلَ ٱلصَّٰلِحَٰتِ فَأُوْلَٰٓئِكَ لَهُمُ ٱلدَّرَجَٰتُ ٱلۡعُلَىٰ ٧٥

75. Ruuxiise u yimaadda isagoo mu'min ah oo falay camal fiican kuwaas waxaa u sugnaaday jannooyinka sare.

جَنَّٰتُ عَدۡنٖ تَجۡرِي مِن تَحۡتِهَا ٱلۡأَنۡهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَاۚ وَذَٰلِكَ جَزَآءُ مَن تَزَكَّىٰ ٧٦

76. Jannooyinka nagaadiga (yey gali) ooy socoto dhexdeeda wabiyaal iyagoo ku waari dhexdeeda, taasina waa abaalmarinta ciddii nadiif noqota.

وَلَقَدۡ أَوۡحَيۡنَآ إِلَىٰ مُوسَىٰٓ أَنۡ أَسۡرِ بِعِبَادِي فَٱضۡرِبۡ لَهُمۡ طَرِيقٗا فِي ٱلۡبَحۡرِ يَبَسٗا لَّا تَخَٰفُ دَرَكٗا وَلَا تَخۡشَىٰ ٧٧

77. Waxaan dhab ugu waxyoonnay (Nabi) Muuse guuraysii addoomahayga uguna yeel waddo badda oo ingagan, adigoon ka cabsanayn haleel, kana cabsanayn (badda).

فَأَتۡبَعَهُمۡ فِرۡعَوۡنُ بِجُنُودِهِۦ فَغَشِيَهُم مِّنَ ٱلۡيَمِّ مَا غَشِيَهُمۡ ٧٨

78. Waxaana raacay Fircoon (oo wata) colkiisii waxaana ka daboolay badda xaggeeda wax daboolay.

وَأَضَلَّ فِرْعَوْنُ قَوْمَهُۥ وَمَا هَدَىٰ ﴿٧٩﴾

79. Wuxuuna dhumiyey Fircoon qoomkiisii mana hanuunin.

يَٰبَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ قَدْ أَنجَيْنَٰكُم مِّنْ عَدُوِّكُمْ وَوَٰعَدْنَٰكُمْ جَانِبَ ٱلطُّورِ ٱلْأَيْمَنَ وَنَزَّلْنَا عَلَيْكُمُ ٱلْمَنَّ وَٱلسَّلْوَىٰ ﴿٨٠﴾

80. Banii Israa'iilow waxaan idinka korinnay cadawgiinna, waxaanna idinkula yaboohtannay (ballan) dhinicii buurta ee midig, waxaanna ku soo dejinnay kor kiinna malab cireed iyo shimbir.

كُلُوا۟ مِن طَيِّبَٰتِ مَا رَزَقْنَٰكُمْ وَلَا تَطْغَوْا۟ فِيهِ فَيَحِلَّ عَلَيْكُمْ غَضَبِى ۖ وَمَن يَحْلِلْ عَلَيْهِ غَضَبِى فَقَدْ هَوَىٰ ﴿٨١﴾

81. Ka cuna wanaaggaan idinku arzuqay hana ku xadgudbina dhexdiisa, oo idinku dhaco cadhadaydu, ruuxay ku dhacdo cadhadaydu dhab buu u hoobtay (halaagmay).

وَإِنِّى لَغَفَّارٌ لِّمَن تَابَ وَءَامَنَ وَعَمِلَ صَٰلِحًا ثُمَّ ٱهْتَدَىٰ ﴿٨٢﴾

82. Anigu waan u dhaafid badanahay ruuxii toobad keena oo rumeeya oo fala wanaagga oo hanuuna.

Ma sinna cid dambiile ah oo gali naar uusan kana dhimanayn kuna noolaanayn iyo ruux xaqa rumeeyey oo camal fiican falay oo janno ku waari, waxaana sugnaaday in ehelu jannaha sare loo arki sida xiddigga markii Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) la warsaday inay Nabiyada yihiin wuxuu yidhi: Alle Ayaan ku dhaartaye waa kuwa rumeeyey Alle rumeeyena rasuullada. Aayadaha kale waxay sheegi in Alle faray Nabi Muuse inuu garaaco badda isagoon cabsanayn, Fircoonna la halaagay intuu dhumiyey qoomkiisii iyo inuu Alle nicmeeyey Binii Isarr'iii, kana koriyey badbaadiyay colkoodii wanaagna ku arzuqay uuna yahay dambi dhaafe ciddii toobad keenta oo rumeysa. **[Dhaahaa: 74-82].**

* وَمَآ أَعْجَلَكَ عَن قَوْمِكَ يَٰمُوسَىٰ ﴿٨٣﴾

83. Maxaa kaa soo dedejiyey qoomkaagii muusow.

قَالَ هُمْ أُو۟لَآءِ عَلَىٰٓ أَثَرِى وَعَجِلْتُ إِلَيْكَ رَبِّ لِتَرْضَىٰ ﴿٨٤﴾

84. Wuxuu yidhi (Muuse) iyagu waa kuwan raadkaygay ku soo joogaan, waana kuu soo dag

degay Allow si aad iiga raalli noqoto.

85. Wuxuu yidhi (Alle) annagu waxaan imtixaannay qoomkaagii gadaashaa waxaana dhumiyey Saamiri.

قَالَ فَإِنَّا قَدْ فَتَنَّا قَوْمَكَ مِنۢ بَعْدِكَ وَأَضَلَّهُمُ ٱلسَّامِرِىُّ ﴿٨٥﴾

86. Markaasuu u noqday (Nabi Muuse) qoomkiisii isagoo cadhaysan oo walbahaarsan wuxuuna yidhi qoomkayow miyuuna idiin yaboohin Allihiin yabooh wanaagsan, ma waxaa idinku dheeraaday korkiinna ballankii mise waxaad doonteen inay idinku dhacdo cadhada Alle ood u baajiseen ballankaygii.

فَرَجَعَ مُوسَىٰٓ إِلَىٰ قَوْمِهِۦ غَضْبَٰنَ أَسِفًا ۚ قَالَ يَٰقَوْمِ أَلَمْ يَعِدْكُمْ رَبُّكُمْ وَعْدًا حَسَنًا ۚ أَفَطَالَ عَلَيْكُمُ ٱلْعَهْدُ أَمْ أَرَدتُّمْ أَن يَحِلَّ عَلَيْكُمْ غَضَبٌ مِّن رَّبِّكُمْ فَأَخْلَفْتُم مَّوْعِدِى ﴿٨٦﴾

87. Waxay dheheen maanaan u baajin ballankaaga awooddannada waxaase nala saaray culaysyo alaab oo ah waxa qoomku isku qurxin jireen waana tuurray siduu u tuuray saamiri.

قَالُوا۟ مَآ أَخْلَفْنَا مَوْعِدَكَ بِمَلْكِنَا وَلَٰكِنَّا حُمِّلْنَآ أَوْزَارًا مِّن زِينَةِ ٱلْقَوْمِ فَقَذَفْنَٰهَا فَكَذَٰلِكَ أَلْقَى ٱلسَّامِرِىُّ ﴿٨٧﴾

88. Wuxuuna u soo bixiyey dibi muuqaal ah oo cod leh, waxayna dhaheen kani waa ilaahiin iyo ilaahii Muuse wuuna halmaamay.

فَأَخْرَجَ لَهُمْ عِجْلًا جَسَدًا لَّهُۥ خُوَارٌ فَقَالُوا۟ هَٰذَآ إِلَٰهُكُمْ وَإِلَٰهُ مُوسَىٰ فَنَسِىَ ﴿٨٨﴾

89. Miyeyna arkayn inuusan u soo celinayn hadal una hananayn dhib iyo nacfi (midna).

أَفَلَا يَرَوْنَ أَلَّا يَرْجِعُ إِلَيْهِمْ قَوْلًا وَلَا يَمْلِكُ لَهُمْ ضَرًّا وَلَا نَفْعًا ﴿٨٩﴾

Markii Fircoon iyo qoomkiisii la halaagay yaa Nabi Muuse wafdi la baxay si ay u aadaan buurtii lagula hadlay Nabi Muuse, wuuna ka hormaray, hase yeeshee Alle ayaa u sheegay in qoomkiisii la baadiyeeyey intuu ka soo maqnaa, markaas Nabi Muuse noqday isagoo cadhaysan, oo walbahaarsan, markuu arrinta warsadayna ay sheegeen in nin Saamiri la dhihi jiray dhumiyey una sameeyey suuro dibi inay caabudaan isagoo sheegay inuu ilaah yahay, waase wax la yaab leh in dibi la caabudo iyo wax la mid ah, taasina waxay ku tusin in ciddii dhunta ay wareeri oy marba wax caabudi. Alle ayaase xaq sugan ah. **[Dhaahaa: 83-89].**

وَلَقَدْ قَالَ لَهُمْ هَٰرُونُ مِن قَبْلُ يَٰقَوْمِ إِنَّمَا فُتِنتُم بِهِۦ ۖ وَإِنَّ رَبَّكُمُ ٱلرَّحْمَٰنُ فَٱتَّبِعُونِى وَأَطِيعُوٓا۟ أَمْرِى ﴿٩٠﴾

90. Wuxuuna u yidhi Haaruun mar hore qoomkayow waa uun laydinku fidmeeyey, Allihiinna waa Raxmaan ee i raaca, adeecana amarkayga.

قَالُوا۟ لَن نَّبْرَحَ عَلَيْهِ عَٰكِفِينَ حَتَّىٰ يَرْجِعَ إِلَيْنَا مُوسَىٰ ﴿٩١﴾

91. Waxay dhaheen kama tagayno korkiisa inaan ku nagaanno intuu nooga soo noqon Muuse.

قَالَ يَٰهَٰرُونُ مَا مَنَعَكَ إِذْ رَأَيْتَهُمْ ضَلُّوٓا۟ ﴿٩٢﴾

92. Wuxuu yidhi (Muuse) Haaruunow maxaa kuu diiday markaad aragtay inay dhumeen.

أَلَّا تَتَّبِعَنِ ۖ أَفَعَصَيْتَ أَمْرِى ﴿٩٣﴾

93. Inaad isoo raacdo, ma waxaad caasiday amarkeygii.

قَالَ يَبْنَؤُمَّ لَا تَأْخُذْ بِلِحْيَتِى وَلَا بِرَأْسِىٓ ۖ إِنِّى خَشِيتُ أَن تَقُولَ فَرَّقْتَ بَيْنَ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ وَلَمْ تَرْقُبْ قَوْلِى ﴿٩٤﴾

94. Wuxuu yidhi (Haaruun): ina hooyow hay qabannin gadhka iyo madaxa, anigu waxaan ka cabsaday inaad dhahdo waxaad kala gaysay banii israa'iil dhexdooda mana aadan maqlin hadalkayga.

قَالَ فَمَا خَطْبُكَ يَٰسَٰمِرِىُّ ﴿٩٥﴾

95. Wuxuu yidhi (Muuse) xaalkaagu muxuu yahay Saamiriyow.

قَالَ بَصُرْتُ بِمَا لَمْ يَبْصُرُوا۟ بِهِۦ فَقَبَضْتُ قَبْضَةً مِّنْ أَثَرِ ٱلرَّسُولِ فَنَبَذْتُهَا وَكَذَٰلِكَ سَوَّلَتْ لِى نَفْسِى ﴿٩٦﴾

96. Wuxuuna yidhi waxaan arkay waxayna arkin, waxaana qaatay wax ka mid ah raad Rasuul (malaga) waana tuuray, saasayna ii qurxisay naftaydu.

97. Wuxuu yidhi (Muuse): tag, waxaa kuu sugnaaday nolosha inaad dhahdo taabasho ma jirto, waxaana kuu sugnaaday waqti aan lagugu baajinayn, day ilaahaagii aad ahayd mid ku kor nagi (caabudi) waannu gubi markaas waxaanna ku firdhin badda firdhin.

98. Allihiin waa uun Ilaahiinna ah kaan xaq lugu caabudin isaga mooyee, wuuna u waasac noqday wax kasta ogaansho.

قَالَ فَٱذۡهَبۡ فَإِنَّ لَكَ فِي ٱلۡحَيَوٰةِ أَن تَقُولَ لَا مِسَاسَۖ وَإِنَّ لَكَ مَوۡعِدٗا لَّن تُخۡلَفَهُۥۖ وَٱنظُرۡ إِلَىٰٓ إِلَٰهِكَ ٱلَّذِي ظَلۡتَ عَلَيۡهِ عَاكِفٗاۖ لَّنُحَرِّقَنَّهُۥ ثُمَّ لَنَنسِفَنَّهُۥ فِي ٱلۡيَمِّ نَسۡفٗا ٩٧

إِنَّمَآ إِلَٰهُكُمُ ٱللَّهُ ٱلَّذِي لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَۚ وَسِعَ كُلَّ شَيۡءٍ عِلۡمَۢا ٩٨

Wuu ka reebay Haaruun banii israa'iil cibaadada dibiga wuxuuna ugu yeedhay inay Alle uun caabudaan, isagana maqlaan, wayse diideen, markuu soo noqday Nabi Muuse wuu canaantay Haaruun wuxuuna doonay inuu wax yeelleeyo, hase yeeshee Haaruunbaa u caddeeyey sababta kana codsaday inuusan dhibaato u gaysan. Nabi Muusana wuxuu wax warsaday saamiri wuxuuna u sheegay inay naftiisu u qurxisay arrintaas, wuxuuse Muuse ku yidhi: tag adooy ciqaabu kuu sugnaatay oo ah inaad dhahdaa istaabasho ma jirto iyo tii aakhiro, halkiibuuna ku gubay sawirkii dibiga baddana raaciyey illeen Alle waa Ilaah wax walba og. **[Dhaahaa: 90-98].**

99. Saasaan kuugu qisoon (sheegi) warkii hor maray, waxaanna kaa siinnay agtannada quraan.

100. Ciddii ka jeedsata xaggiisa waxay xambaari maalinta qiyaame culays (dambi).

101. Iyagoo ku waari (ciqaabta) dhexdeeda waxaana u xumaaday iyaga maalinta qiyaame rar.

102. Waa maalinta la afuufi suurka, oon soona kulmineyno dambiilayaasha maalintaas iyagoo indho cawlan.

كَذَٰلِكَ نَقُصُّ عَلَيۡكَ مِنۡ أَنۢبَآءِ مَا قَدۡ سَبَقَۚ وَقَدۡ ءَاتَيۡنَٰكَ مِن لَّدُنَّا ذِكۡرٗا ٩٩

مَّنۡ أَعۡرَضَ عَنۡهُ فَإِنَّهُۥ يَحۡمِلُ يَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِ وِزۡرٗا ١٠٠

خَٰلِدِينَ فِيهِۖ وَسَآءَ لَهُمۡ يَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِ حِمۡلٗا ١٠١

يَوۡمَ يُنفَخُ فِي ٱلصُّورِۚ وَنَحۡشُرُ ٱلۡمُجۡرِمِينَ يَوۡمَئِذٖ زُرۡقٗا ١٠٢

103. Wayna is warsan (xansan) dhexdooda maydaan ku nagaannin (adduunyada) toban (maalmood) mooyee.

يَتَخَٰفَتُونَ بَيۡنَهُمۡ إِن لَّبِثۡتُمۡ إِلَّا عَشۡرٗا ١٠٣

104. Annagaa og waxay dhihi, markuu dhihi kooda ugu jid leh maydaan nagaannin maalin mooyee.

نَّحۡنُ أَعۡلَمُ بِمَا يَقُولُونَ إِذۡ يَقُولُ أَمۡثَلُهُمۡ طَرِيقَةً إِن لَّبِثۡتُمۡ إِلَّا يَوۡمٗا ١٠٤

105. Waxay ku warsan buuraha waxaad dhahdaa waxaa burburin Rabbigey burburin.

وَيَسۡـَٔلُونَكَ عَنِ ٱلۡجِبَالِ فَقُلۡ يَنسِفُهَا رَبِّي نَسۡفٗا ١٠٥

106. Wuxuuna ka yeeli meel siman oo ebar ah.

فَيَذَرُهَا قَاعٗا صَفۡصَفٗا ١٠٦

107. Ku arki maysid qallooc iyo taag midna.

لَّا تَرَىٰ فِيهَا عِوَجٗا وَلَآ أَمۡتٗا ١٠٧

108. Maalintaas waxay raaci dhawaaqaha, kamana leexdaan, waxayna u xasileen cododku Allaha Raxmaana, mana maqashid shanqadh mooyee.

يَوۡمَئِذٖ يَتَّبِعُونَ ٱلدَّاعِيَ لَا عِوَجَ لَهُۥۖ وَخَشَعَتِ ٱلۡأَصۡوَاتُ لِلرَّحۡمَٰنِ فَلَا تَسۡمَعُ إِلَّا هَمۡسٗا ١٠٨

109. Maalintaas ma anfacdo shafeeco cid Allaha Raxmaana idmo oo ka raalli noqday hadalkiisa mooyee.

يَوۡمَئِذٖ لَّا تَنفَعُ ٱلشَّفَٰعَةُ إِلَّا مَنۡ أَذِنَ لَهُ ٱلرَّحۡمَٰنُ وَرَضِيَ لَهُۥ قَوۡلٗا ١٠٩

110. Wuxuu og yahay Alle waxa hortooda ah iyo waxa ka dambeeya mana ku koobayaan Alle ogaansho.

يَعۡلَمُ مَا بَيۡنَ أَيۡدِيهِمۡ وَمَا خَلۡفَهُمۡ وَلَا يُحِيطُونَ بِهِۦ عِلۡمٗا ١١٠

111. Waxay u khuduucday wajiyadu Allaha nool ee wax maamula, waxaana khasaaray ruuxii xambaara dulmi.

* وَعَنَتِ ٱلۡوُجُوهُ لِلۡحَيِّ ٱلۡقَيُّومِۖ وَقَدۡ خَابَ مَنۡ حَمَلَ ظُلۡمٗا ١١١

وَمَن يَعْمَلْ مِنَ ٱلصَّٰلِحَٰتِ وَهُوَ مُؤْمِنٌ فَلَا يَخَافُ ظُلْمًا وَلَا هَضْمًا ﴿١١٢﴾

112. Ruuxii fala wanaag isagoo rumeeyey kama cabsado dulmi iyo nusqaamin midna.

Siduu Alle uga warramay Nabiga warkii Nabi Muuse iyo Fircoon iyo wixii dhex maray yuu Alle ugu qisoon Nabiga warkii kuwii hore, ciddii xaqa ka jeedsatana wuxuu xambaari qiyaamada dambi wuxuuna imaan isagoo dullaysan oon wax garanayn, waana maalinta buuruhu burburi oy dadku khushuuci. Cid hadli iyo cid shafeecina ma jirto idanka Alle la'aantii illeen Alle ayaa wax walba koobaye wajiyaduna u hoggaansami, waxaana khasaari dulmiile, mu'minkuse kama cabsado dulmi. Saas darteed waa in wanaagga lagu dadaalo xumaantana laga fogaado. **[Dhaahaa: 99-112].**

وَكَذَٰلِكَ أَنزَلْنَٰهُ قُرْءَانًا عَرَبِيًّا وَصَرَّفْنَا فِيهِ مِنَ ٱلْوَعِيدِ لَعَلَّهُمْ يَتَّقُونَ أَوْ يُحْدِثُ لَهُمْ ذِكْرًا ﴿١١٣﴾

113. Saasaannu kugu soo dejinnay quraan carabi ah uguna caddaynay (celcelinay) dhexdiisa gooddi inay dhawrsadaan darteed ama u timaado xususs (waano).

فَتَعَٰلَى ٱللَّهُ ٱلْمَلِكُ ٱلْحَقُّ ۗ وَلَا تَعْجَلْ بِٱلْقُرْءَانِ مِن قَبْلِ أَن يُقْضَىٰٓ إِلَيْكَ وَحْيُهُۥ ۖ وَقُل رَّبِّ زِدْنِى عِلْمًا ﴿١١٤﴾

114. Waxaa sarreeya Allaha xaakimka xaqa ah, hana ku degdegin quraanka ka hor dhammayn waxyigiisa xaggaaga, waxaadna dhahdaa Allow ii kordhi cilmi.

وَلَقَدْ عَهِدْنَآ إِلَىٰٓ ءَادَمَ مِن قَبْلُ فَنَسِىَ وَلَمْ نَجِدْ لَهُۥ عَزْمًا ﴿١١٥﴾

115. Dhab ahaan yaan ula ballantannay Aadan mar hore wuuna halmaamay kama aannaan helin niyo adag.

وَإِذْ قُلْنَا لِلْمَلَٰٓئِكَةِ ٱسْجُدُوا۟ لِءَادَمَ فَسَجَدُوٓا۟ إِلَّآ إِبْلِيسَ أَبَىٰ ﴿١١٦﴾

116. Xusuuso markaan ku nidhi malaa'igta u sujuuda Aadam. Wayna sujuudeen Ibliis mooyee oo diiday.

فَقُلْنَا يَٰٓـَٔادَمُ إِنَّ هَٰذَا عَدُوٌّ لَّكَ وَلِزَوْجِكَ فَلَا يُخْرِجَنَّكُمَا مِنَ ٱلْجَنَّةِ فَتَشْقَىٰٓ ﴿١١٧﴾

117. Waxaanna nidhi Aadamow kani (Ibliis) waa colkaaga iyo colka haweeneydaada ee yuusan idinka bixinnin jannada ood dhibbooto.

إِنَّ لَكَ أَلَّا تَجُوعَ فِيهَا وَلَا تَعۡرَىٰ ﴿١١٨﴾

118. Waxaa kuu sugnaaday inaadan ku gaajoon dhexdeeda kuna arradin.

وَأَنَّكَ لَا تَظۡمَؤُاْ فِيهَا وَلَا تَضۡحَىٰ ﴿١١٩﴾

119. Waxaana kuugu sugnaaday inaadan ku oomin dhexdeeda kuna qorroxoobin.

فَوَسۡوَسَ إِلَيۡهِ ٱلشَّيۡطَٰنُ قَالَ يَٰٓـَٔادَمُ هَلۡ أَدُلُّكَ عَلَىٰ شَجَرَةِ ٱلۡخُلۡدِ وَمُلۡكٖ لَّا يَبۡلَىٰ ﴿١٢٠﴾

120. Waxaase waswaasiyey shaydaan wuxuuna yidhi Aadamow ma ku tusiyaa geedda waaridda iyo xukun aan gaboobayn.

فَأَكَلَا مِنۡهَا فَبَدَتۡ لَهُمَا سَوۡءَٰتُهُمَا وَطَفِقَا يَخۡصِفَانِ عَلَيۡهِمَا مِن وَرَقِ ٱلۡجَنَّةِۚ وَعَصَىٰٓ ءَادَمُ رَبَّهُۥ فَغَوَىٰ ﴿١٢١﴾

121. Wayna cuneen xaggeeda waxaana u muuqday cawradoodii, waxayna noqdeen kuwa isku dhejiya korkooda caleenta jannada, wuu caasiyey aadan Allehiis wuuna leexday.

ثُمَّ ٱجۡتَبَٰهُ رَبُّهُۥ فَتَابَ عَلَيۡهِ وَهَدَىٰ ﴿١٢٢﴾

122. Waxaase doortay Allehiis wuuna ka toobad aqbalay oo hanuuniyey.

Quraanka Alle ayaa ku dejiyey Nabiga, wuxuuna ku celceliyey wax sheeg si loo wacdoomo, wuxuuna Alle faray Nabiga inuusan ku degdegin akhriska quraanka intaan la dhammayn waxyigiisa, wuxuuna faray inuu Alle warsado cilmi kordhin. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Ilaahow igu anfac waxaad i bartay ina bar wax i anfici. Iina kordhi cilmi. Mahadna Alle ayaa leh si kasta. (Tirmidi iyo Ibnu Maajah). Inta ugu danbeysaa ma ansixin. Qisada Nabi Aadamse waxay ku faah faahsan tahay suuradda al baqarah. Waxaase jirta inuu Ibliis col u yahay dadka had iyo jeer, cid kastana isku dayi inuu dhumiyo cid Alle ka dhowro mooyee. **[Dhaahaa: 113-122].**

قَالَ ٱهۡبِطَا مِنۡهَا جَمِيعَۢاۖ بَعۡضُكُمۡ لِبَعۡضٍ عَدُوّٞۖ فَإِمَّا يَأۡتِيَنَّكُم مِّنِّي هُدٗى فَمَنِ ٱتَّبَعَ هُدَايَ فَلَا يَضِلُّ وَلَا يَشۡقَىٰ ﴿١٢٣﴾

123. Wuxuu yidhi (Alle) ka hoobta jannada dhammaantiin qaarkiin qaar col buu u yahaye, hadduu xaggayga idiinka yimaaddo hanuun ruuxii raaca hanuunkeyga ma dhumo

(adduunka) mana xumaado (aakhiro).

124. Ruuxiisa ka jeedsada xuskeyga (quraanka) waxaa u sugnaaday nolol cidhiidhi ah, waxaanna soo kulminaynaa maalinta qiyaame isagoo arag la'.

وَمَنْ أَعْرَضَ عَن ذِكْرِى فَإِنَّ لَهُۥ مَعِيشَةً ضَنكًا وَنَحْشُرُهُۥ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ أَعْمَىٰ ﴿١٢٤﴾

125. Wuxuuna dhihi Allow maxaad ii soo kulmisay (keentay) anoo arag la' oona ahaa arke (adduunkii).

قَالَ رَبِّ لِمَ حَشَرْتَنِىٓ أَعْمَىٰ وَقَدْ كُنتُ بَصِيرًا ﴿١٢٥﴾

126. Wuxuu yidhaa (Alle) waa saas waxaa kuu timid aayadahannaga waadna halmaantay saasaana maanta lagaaga tagi (sida halmaan).

قَالَ كَذَٰلِكَ أَتَتْكَ ءَايَٰتُنَا فَنَسِيتَهَا ۖ وَكَذَٰلِكَ ٱلْيَوْمَ تُنسَىٰ ﴿١٢٦﴾

127. Saasaan ku abaal marinnaa ciddii xadgudubta oon rumayn aayaadka Allehiis cadaabka aakhiraana daran oo hadhid badan.

وَكَذَٰلِكَ نَجْزِى مَنْ أَسْرَفَ وَلَمْ يُؤْمِنۢ بِـَٔايَٰتِ رَبِّهِۦ ۚ وَلَعَذَابُ ٱلْءَاخِرَةِ أَشَدُّ وَأَبْقَىٰٓ ﴿١٢٧﴾

128. Miyuuna u caddaan gaalada intaan halaagnay hortood quruumo iyagoo ku socda guryahooda, taasna calaamaa ugu sugan kuwa caqliga leh.

أَفَلَمْ يَهْدِ لَهُمْ كَمْ أَهْلَكْنَا قَبْلَهُم مِّنَ ٱلْقُرُونِ يَمْشُونَ فِى مَسَٰكِنِهِمْ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَٰتٍ لِّأُو۟لِى ٱلنُّهَىٰ ﴿١٢٨﴾

129. Haddayna jirin kalimad u hor martay Allehaa iyo muddo magacaaban wuxuu ahaan lahaa cadaabku mid ku soo deg dega.

وَلَوْلَا كَلِمَةٌ سَبَقَتْ مِن رَّبِّكَ لَكَانَ لِزَامًا وَأَجَلٌ مُّسَمًّى ﴿١٢٩﴾

130. Ee ku samir waxay sheegi kuna tasbiixso adoo mahadda Allehaa ku dheehan ka hor qorrax soo bax iyo ka hor dhicidda, saacadaha habeenkiina

فَٱصْبِرْ عَلَىٰ مَا يَقُولُونَ وَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ قَبْلَ طُلُوعِ ٱلشَّمْسِ وَقَبْلَ غُرُوبِهَا ۖ وَمِنْ ءَانَآئِ ٱلَّيْلِ فَسَبِّحْ

tasbiixso (tuko) iyo darfaha maalinta inaad raalli noqoto.

وَأَطْرَافَ ٱلنَّهَارِ لَعَلَّكَ تَرْضَىٰ ﴿١٣٠﴾

Waa la soo sheegay qisada Nabi Aadam iyo Ibliis iyo siduu dadka col ugu yahay, tan kale ciddii raacda quraanka ma dhumo mana khasaaro.

Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: wuxuu Alle u damiin qaaday ciddi quraanka akhrida oo ku camal fasha in uusan dhumin adduunyada, kuna xumaannin aakhiro, ciddise xaqa ka jeedsata waxay noolaan nolol xun, wuxuuna imaan qiyaamada isagoo indho la' maxaa yeelay adduunkii yuu xaqa ka jeedsaday, saasaana lagu abaal marin ciddii xadgudubta, waana in lagu waano qaato ummadihii hore ee la halaagay, Alle na cidduu doono wuu halaagaa hadduusan waqti la sugaynin, waase in la adkeysto lana samro, cibaadadana lagu dadaalo maalin iyo habeenba, illeen wixii Nabiga la faray ummaddana waa la faraye si Alle inoo nabadgaliyo maalinta qiyaame. **[Dhaahaa: 123-130].**

131. Haw taagin indhahaaga waxaan ugu raaxaynay nooc ka mid ah oo quruxda nolashaa adduun si aan ugu fidnayno, rizqiga Allehaa yaase khayr roon oo hadhid badan.

وَلَا تَمُدَّنَّ عَيْنَيْكَ إِلَىٰ مَا مَتَّعْنَا بِهِۦٓ أَزْوَٰجًا مِّنْهُمْ زَهْرَةَ ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا لِنَفْتِنَهُمْ فِيهِ ۚ وَرِزْقُ رَبِّكَ خَيْرٌ وَأَبْقَىٰ ﴿١٣١﴾

132. Far ehelkaaga salaadda kuna samir korkeeda ku warsan mayno rizqiye annagaa ku arzuqi. Cidhibta (fiicanna) waxaa iska leh dhawrsashada.

وَأْمُرْ أَهْلَكَ بِٱلصَّلَوٰةِ وَٱصْطَبِرْ عَلَيْهَا ۖ لَا نَسْـَٔلُكَ رِزْقًا ۖ نَّحْنُ نَرْزُقُكَ ۗ وَٱلْعَٰقِبَةُ لِلتَّقْوَىٰ ﴿١٣٢﴾

133. Waxay dheheen gaaladii muu noola yimaaddo aayad xagga Allehiis ka timid, miyuuna u imaannin maraggii wixii ku sugnaa kutubihii hore.

وَقَالُوا۟ لَوْلَا يَأْتِينَا بِـَٔايَةٍ مِّن رَّبِّهِۦٓ ۚ أَوَلَمْ تَأْتِهِم بَيِّنَةُ مَا فِى ٱلصُّحُفِ ٱلْأُولَىٰ ﴿١٣٣﴾

134. Haddaan ku halaagno cadaab rasuulka (iyo quraanka) ka hor waxay dhihi lahaayeen Rabbigeenow maxaad noogu diri wayday rasuul oon raacno aayaadkaaga

وَلَوْ أَنَّآ أَهْلَكْنَٰهُم بِعَذَابٍ مِّن قَبْلِهِۦ لَقَالُوا۟ رَبَّنَا لَوْلَآ أَرْسَلْتَ إِلَيْنَا رَسُولًا فَنَتَّبِعَ ءَايَٰتِكَ مِن قَبْلِ أَن نَّذِلَّ وَنَخْزَىٰ ﴿١٣٤﴾

ka hor dullowgannaga iyo fadeexadannada.

135. Waxaad dhahdaa (Nabiyow) dhammaan way sugi ee suga, waxaad ogaan doontaan cidda jidka toosan iyo cidda hanuusane.

قُلْ كُلٌّ مُّتَرَبِّصٌ فَتَرَبَّصُوا۟ ۖ فَسَتَعْلَمُونَ مَنْ أَصْحَٰبُ ٱلصِّرَٰطِ ٱلسَّوِىِّ وَمَنِ ٱهْتَدَىٰ ﴿١٣٥﴾

Alle wuxuu faray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuusan dayin waxa adduunyo ah ee loogu raaxeeyey kuwaas gaalada ah illeen waa wax yar oo tagi, ee uu salaadda faro kuna samro, Alle ayaana wax arzuqa, cidhib fiicanna waxaa iska leh ciddii dhawrsata. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: waxaan idiinku cabsi badnahay waxa Alle idin siin oo quruxda adduunka ah waxayna dhaheen waa maxay quruxda adduunka Rasuul allow, wuxuu yidhi: waa barakada dhulka. Taasina u jeeddadu ma aha inaan la shaqaysan, waa inayan adduunyada kaliya ku shuqlinnin. Aayadaha dambe waxay ka warrami inay gaaladu xaqa diidi isagoo Nabiga loogu caddeyey kutubihii hore, haddii la halaago iyagoon rasuul loo soo dirin waxay ku caban lahaayeen maxaa naloo halaagay annagoon rasuul naloo soo dirin. Hase la sugo way kala caddaan cidda toosan iyo tan qalloocsan. Waxaana sugnaatay in ummadda Nabigu ugu badnaan maalinta qiyaame. Waase in wanaagga lagu dadaalo si loo noqdo ummadda Nabiga. **[Dhaahaa: 131-135].**

Suurat Al-Anbiyaa'

سُورَةُ الأَنبِيَاءِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaa u dhawaaday dadka xisaabtoodii iyagoo halmaansho ku sugan oo jeedsan.

ٱقْتَرَبَ لِلنَّاسِ حِسَابُهُمْ وَهُمْ فِى غَفْلَةٍ مُّعْرِضُونَ ﴿١﴾

2. Quraan kasta oo uga yimaadda xagga Rabbigood kana soo darriya way maqlaan iyagoo ciyaari.

مَا يَأْتِيهِم مِّن ذِكْرٍ مِّن رَّبِّهِم مُّحْدَثٍ إِلَّا ٱسْتَمَعُوهُ وَهُمْ يَلْعَبُونَ ﴿٢﴾

3. Oy shuqloon tahay quluubtoodu, waxayna hoos u dhigeen faqii kuwii dulmi falay (iyagoo dhihi) kanu ma waxaan dad idinkoo kale ahayn baa, ma waxaad u imanaysaan sixir idinkoo arka.

لَاهِيَةً قُلُوبُهُمْ ۗ وَأَسَرُّوا۟ ٱلنَّجْوَى ٱلَّذِينَ ظَلَمُوا۟ هَلْ هَٰذَآ إِلَّا بَشَرٌ مِّثْلُكُمْ ۖ أَفَتَأْتُونَ ٱلسِّحْرَ وَأَنتُمْ تُبْصِرُونَ ﴿٣﴾

4. Wuxuu yidhi (Nabigii): Rabbigay baa og hadalka samada ku sugan iyo dhulka, waana maqle oge ah.

قَالَ رَبِّى يَعْلَمُ ٱلْقَوْلَ فِى ٱلسَّمَآءِ وَٱلْأَرْضِ ۖ وَهُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْعَلِيمُ ﴿٤﴾

5. Waxay dheheen (gaaladii) saas ma aha ee waa qarowyo, saa ma aha ee wuu been abuurtay, saas ma aha ee waa gabayaa ee ha noo keeno aayad sidii lagu diray kuwii hore.

بَلْ قَالُوٓا۟ أَضْغَٰثُ أَحْلَٰمٍ بَلِ ٱفْتَرَىٰهُ بَلْ هُوَ شَاعِرٌ فَلْيَأْتِنَا بِـَٔايَةٍ كَمَآ أُرْسِلَ ٱلْأَوَّلُونَ ﴿٥﴾

6. Mayna rumeynin hortood magaalo aan halaag (la doonnay) ee ma iyagaa rumeyn.

مَآ ءَامَنَتْ قَبْلَهُم مِّن قَرْيَةٍ أَهْلَكْنَٰهَا ۖ أَفَهُمْ يُؤْمِنُونَ ﴿٦﴾

Suuraddan waxaa lagu magacaabay suuradda ambiyada, maxaa yeelay waxaa ku soo arooray qisadooda. Aayadahanna waxay ka warrami inay saacaddii qiyaame dhawdahay dadkoo halmaansan. Wixii u yimaadda gaalada oo xaq ahna way iska dhagaysan iyagoo ciyaari, faq xunna faqi oo isu sheegi inayan maqlin dad la mid ah, xaqana ay sixir ku sheegeen, Alle ayaase og waxa cirka iyo dhulka ku sugan maqlina, quraankuna ma aha wax lagu qarway ama heesaa la yimid, Nabiguna wuxuu ula yimid xaq cad, maxayse waano tari mar haddii xaqa la diido lana caasiyo.

Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: maxaad leedihiin oo u warsanaysaan ehelu kitaabka waxay haystaan iyagoo leexiyey oo badalay o siyaadiyey oo nusqaamiyey, kitaabkiinaana u dambeeyey kitaabaha, waad akhrineysaan isagoo cad oon la dheehin.(Bukhaari si u dhow sidaan) **[Al-Anbiyaa': 1-6].**

وَمَآ أَرۡسَلۡنَا قَبۡلَكَ إِلَّا رِجَالٗا نُّوحِيٓ إِلَيۡهِمۡۖ فَسۡـَٔلُوٓاْ أَهۡلَ ٱلذِّكۡرِ إِن كُنتُمۡ لَا تَعۡلَمُونَ ٧

7. Maannaan dirin hortaa rag mooyee, kuwaas oon u waxyoonnay, ee warsada kuwa cilmiga leh haddaydaan wax ogayn.

وَمَا جَعَلۡنَٰهُمۡ جَسَدٗا لَّا يَأۡكُلُونَ ٱلطَّعَامَ وَمَا كَانُواْ خَٰلِدِينَ ٨

8. Kamaannaan dhigin (Nabiyada) jasad (muuqaal) oon cunayn cunno mana ahayn kuwo waara.

ثُمَّ صَدَقۡنَٰهُمُ ٱلۡوَعۡدَ فَأَنجَيۡنَٰهُمۡ وَمَن نَّشَآءُ وَأَهۡلَكۡنَا ٱلۡمُسۡرِفِينَ ٩

9. Markaasna waxaan u rumeynay yaboohii waana korinnay iyagii iyo ciddaan doono, waxaanna halaagnay xadgudbayaasha.

لَقَدۡ أَنزَلۡنَآ إِلَيۡكُمۡ كِتَٰبٗا فِيهِ ذِكۡرُكُمۡۚ أَفَلَا تَعۡقِلُونَ ١٠

10. Waxaan idiin soo dejinnay kitaab sharaftiinnu ku sugan tahayee miyeydaan kasayn.

وَكَمۡ قَصَمۡنَا مِن قَرۡيَةٖ كَانَتۡ ظَالِمَةٗ وَأَنشَأۡنَا بَعۡدَهَا قَوۡمًا ءَاخَرِينَ ١١

11. Badanaana intaan halaagnay magaalo dulmi badan (dadkeedu) oon ahaysiinay gadaasheed qoom kale.

فَلَمَّآ أَحَسُّواْ بَأۡسَنَآ إِذَا هُم مِّنۡهَا يَرۡكُضُونَ ١٢

12. Markay kaseen cadaabkannaga yey ahaayeen kuwo ka carari.

لَا تَرۡكُضُواْ وَٱرۡجِعُوٓاْ إِلَىٰ مَآ أُتۡرِفۡتُمۡ فِيهِ وَمَسَٰكِنِكُمۡ لَعَلَّكُمۡ تُسۡـَٔلُونَ ١٣

13. Ha cararina kuna noqda wixii laydiinku raaxeeyey iyo guryihiinna waxay u dhawdahay in wax laydin warsadee.

14. Waxay dhaheen halaaggannagee waxaan nahay daalimiin.

15. Saasna kama tagin qayladoodu intaan ka yeello wax la shafay oo bakhtiya.

قَالُواْ يَٰوَيۡلَنَآ إِنَّا كُنَّا ظَٰلِمِينَ ١٤

فَمَا زَالَت تِّلۡكَ دَعۡوَىٰهُمۡ حَتَّىٰ جَعَلۡنَٰهُمۡ حَصِيدًا خَٰمِدِينَ ١٥

Illeen wuxuu u waxyooday Nabiyo badan oo rag ah oon malaa'ig ahayn, wuxuuna faray in wax la weydiiyo dadka cilmiga iyo aqoonta leh, Nabiyaduna waxbay cuni jireen ee ma ahayn muuqaal aan wax cunin, wayna dhinteen.

Alle na wuxuu u rumeeyey yaboohiisii wuuna koriyey cidduu doono, wuxuuna halaagi xadgudbayaasha, quraankuna waa sharafta mu'miniinta ciddii dulmi fashana waa la halaagi waxaana lagu badali dad kale. Markay dhibaatada arkaanna way carari, waxaana loo dhihi ha cararina ee raaxadiinna ku noqda iyo guryihiinna waxbaa laydin warsane, wayna shaleytoon intay ka noqdaan wax ebar ah oo bakhti ah. **[Al-Anbiyaa': 7-15].**

16. Ma aannaan abuurin samooyinka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya annagoo ciyaari.

17. Haddaan doonno madadaallo inaan yeelanno waxaan ka yeelan lahayn agtannada haddaan falayno.

18. Xaqaanse ku gannaa baadilka oo tirtira markaasuu tagaa, waxaa idiinku sugnaaday halaag waxaad sheegaysaan.

19. Ilaahay waxaa u sugnaaday waxa samooyinka ku sugan iyo dhulka, kuwa Alle agtiisa ahna iskama kibriyaan cibaadadiisa kamana daalaan.

20. Wayna nasahaan habeen iyo dharaarba kamana noogaan.

وَمَا خَلَقۡنَا ٱلسَّمَآءَ وَٱلۡأَرۡضَ وَمَا بَيۡنَهُمَا لَٰعِبِينَ ١٦

لَوۡ أَرَدۡنَآ أَن نَّتَّخِذَ لَهۡوٗا لَّٱتَّخَذۡنَٰهُ مِن لَّدُنَّآ إِن كُنَّا فَٰعِلِينَ ١٧

بَلۡ نَقۡذِفُ بِٱلۡحَقِّ عَلَى ٱلۡبَٰطِلِ فَيَدۡمَغُهُۥ فَإِذَا هُوَ زَاهِقٞۚ وَلَكُمُ ٱلۡوَيۡلُ مِمَّا تَصِفُونَ ١٨

وَلَهُۥ مَن فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۚ وَمَنۡ عِندَهُۥ لَا يَسۡتَكۡبِرُونَ عَنۡ عِبَادَتِهِۦ وَلَا يَسۡتَحۡسِرُونَ ١٩

يُسَبِّحُونَ ٱلَّيۡلَ وَٱلنَّهَارَ لَا يَفۡتُرُونَ ٢٠

أَمِ ٱتَّخَذُوٓاْ ءَالِهَةً مِّنَ ٱلۡأَرۡضِ هُمۡ يُنشِرُونَ ﴿٢١﴾

21. Mise waxay yeesheen (gaaladii) ilaahyaal dhulka xaggiisa oo wax soo nooleeya.

لَوۡ كَانَ فِيهِمَآ ءَالِهَةٌ إِلَّا ٱللَّهُ لَفَسَدَتَاۚ فَسُبۡحَٰنَ ٱللَّهِ رَبِّ ٱلۡعَرۡشِ عَمَّا يَصِفُونَ ﴿٢٢﴾

22. Hadday yihiin dhexdooda (samada iyo dhulka) ilaahyo way fasaadi lahaayeen, waxaa ka nasahan Rabbiga carshiga leh waxay ku tilmaami.

لَا يُسۡـَٔلُ عَمَّا يَفۡعَلُ وَهُمۡ يُسۡـَٔلُونَ ﴿٢٣﴾

23. Lama warsanayo wuxuu falo iyagase waa la warsan.

Ilaaheen waa ka dheer yahay ciyaar iyo xumaanba, cirka, dhulka iyo khalqiga kalana wuxuu u abuuray xaq iyo in cid walba laga abaal mariyo waxay kasbato. Malaa'igtuna iskama waynayso cibaadada Alle, kamana daalaan habeen iyo dharaar nasihiddiisa, wax isaga ka soo hadhay oo ilaah ah oo wax nooleeyana ma jiro. Hadday cirka iyo dhulka joogaan ilaahyo way fasaadi lahaayeen oo xumaan lahaayeen, maxaa yeelay midba waxbuu dooni lahaa markaasuu amarku iska hor imaan lahaa, saas darteed Ilaaheennu waa kali, wahella uma baahna, xumaanna waa ka fog yahay, sharafna isagaa iska leh, wuxuu doonana wuu falaa, cid warsanna ma jirto. Ruuxii caqli darro iyo islawayni aan meel jirin u diidana waa jaahil aan wax ogayn lana kulmi abaalkiisa.

Saas darteed waa in si dhab ah loo caabudo Alle kaliya. **[Al-Anbiyaa': 16-23].**

أَمِ ٱتَّخَذُواْ مِن دُونِهِۦٓ ءَالِهَةً۬ۖ قُلۡ هَاتُواْ بُرۡهَٰنَكُمۡۖ هَٰذَا ذِكۡرُ مَن مَّعِيَ وَذِكۡرُ مَن قَبۡلِيۚ بَلۡ أَكۡثَرُهُمۡ لَا يَعۡلَمُونَ ٱلۡحَقَّ فَهُم مُّعۡرِضُونَ ﴿٢٤﴾

24. Mise waxay yeesheen Alle ka sokow ilaahyo, waxaad dhahdaa keena xujadiinna, kani waa (quraanka) sheegi waxa ila jooga iyo sheegiddii kuwii iga horreeyey, badidoodse ma oga xaqa wayna ka jeedsan.

وَمَآ أَرۡسَلۡنَا مِن قَبۡلِكَ مِن رَّسُولٍ إِلَّا نُوحِيٓ إِلَيۡهِ أَنَّهُۥ لَآ إِلَٰهَ إِلَّآ أَنَا۠ فَٱعۡبُدُونِ ﴿٢٥﴾

25. Rasuulkaan hortaa dirnayba waxaan u waxyoonnay ku xaq lugu caabudo aan ani ahayn ma jiro ee i caabuda.

وَقَالُواْ ٱتَّخَذَ ٱلرَّحۡمَٰنُ وَلَدٗاۗ سُبۡحَٰنَهُۥۚ بَلۡ عِبَادٞ مُّكۡرَمُونَ ﴿٢٦﴾

26. Waxay dhaheen gaaladii wuxuu yeeshay (Allaha) Raxmaana ilmo, waa ka nasahan yahay,

waase addoommo (malaa'igtu) la sharrifo.

27. Kagama hor maraan hadal iyaguna amarkiisay ku camal falaan.

لَا يَسْبِقُونَهُۥ بِٱلْقَوْلِ وَهُم بِأَمْرِهِۦ يَعْمَلُونَ ﴿٢٧﴾

28. Wuxuu og yahay waxa hortooda iyo gadaashooda ah umana shafeecaan ciduu ka raalli yahay mooyee iyaguna cabsidiisay la baqaan.

يَعْلَمُ مَا بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَمَا خَلْفَهُمْ وَلَا يَشْفَعُونَ إِلَّا لِمَنِ ٱرْتَضَىٰ وَهُم مِّنْ خَشْيَتِهِۦ مُشْفِقُونَ ﴿٢٨﴾

29. Ruuxii dhaha oo ka mid ah malaa'igta anaa ilaah ah Alle ka sokow, kaas waxaannu ku abaal marin jahannamo, saasaanna ku abaal marinnaa daalimiinta.

* وَمَن يَقُلْ مِنْهُمْ إِنِّىٓ إِلَٰهٌ مِّن دُونِهِۦ فَذَٰلِكَ نَجْزِيهِ جَهَنَّمَ ۚ كَذَٰلِكَ نَجْزِى ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٢٩﴾

Alle waa kali wax ka soo hadhay oo cibaado mudanna ma jiro, saasaana ku qoran quraanka iyo kutubtii ka horraysayba, rasuul kastana wuxuu Alle u waxyooday in Ilaahay kali yahay lana caabudo.

Malaa'igtuna ilmo uma aha Alle, waase addoomo sharaf leh, oon Alle caasiyayn, uuna og yahay waxay fali iyo xaalkoodaba, waxay u shafeecina ma jiro cid Alle ka raalli noqday mooyee, isaga unbayna ka yaabaan, kana cabsadaan, ciddii ilaahnimo sheegata Alle ka sokow wuxuu Ilaahay ku abaal marin naarta jahannamo, saasuuna ku abaalmariyaa daalimiinta, saas darteed Alleha xaqa ah, wax dila, wax nooleeya; wax arzuqa, roobka keena, sharciga, dejiya loo wada baahan yahay, ka kaaftooma dadka, waa uun Ilaaheenna awoodda leh. **[Al-Anbiyaa': 24-29].**

30. Miyeyna arkayn kuwii gaaloobay in samooyinka iyo dhulku ahaayeen kuwo isku dhaggan oona kala bixinnay, kana yeelnay biyaha wax kasta oo nool ee miyeyna rumaynayn.

أَوَلَمْ يَرَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓا۟ أَنَّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ كَانَتَا رَتْقًا فَفَتَقْنَٰهُمَا ۖ وَجَعَلْنَا مِنَ ٱلْمَآءِ كُلَّ شَىْءٍ حَىٍّ ۖ أَفَلَا يُؤْمِنُونَ ﴿٣٠﴾

31. Waxaanna yeellay dhulka sugayaal (buuro) inayna la iilannin dadka, waxaanna yeellay dhexdeeda karimo waddooyin ah, inay ku toosaan.

وَجَعَلْنَا فِى ٱلْأَرْضِ رَوَٰسِىَ أَن تَمِيدَ بِهِمْ وَجَعَلْنَا فِيهَا فِجَاجًا سُبُلًا لَّعَلَّهُمْ يَهْتَدُونَ ﴿٣١﴾

32. Waxaanna ka yeelnay samada saanqaaf ilaashan iyaguna calaamooyinkeeda way ka jeedsan.

وَجَعَلْنَا ٱلسَّمَآءَ سَقْفًا مَّحْفُوظًا ۖ وَهُمْ عَنْ ءَايَٰتِهَا مُعْرِضُونَ ﴿٣٢﴾

33. Alle waa kan abuuray habeenka, maalinta, qorraxda iyo dayaxa, mid kastana falag buu dhex dabbaalan.

وَهُوَ ٱلَّذِى خَلَقَ ٱلَّيْلَ وَٱلنَّهَارَ وَٱلشَّمْسَ وَٱلْقَمَرَ ۖ كُلٌّ فِى فَلَكٍ يَسْبَحُونَ ﴿٣٣﴾

34. Maannan ka yeelin dadka ka horreeyey kuwo waara, ee haddaad dhimato ma iyagaa waari (gaaladu).

وَمَا جَعَلْنَا لِبَشَرٍ مِّن قَبْلِكَ ٱلْخُلْدَ ۖ أَفَإِيْن مِّتَّ فَهُمُ ٱلْخَٰلِدُونَ ﴿٣٤﴾

35. Naf kastaa waxay dhadhamin geeri waxaanna idinku imtixaami shar iyo khayr ibtilo darteed, xaggannagaana laydiin soo celin.

كُلُّ نَفْسٍ ذَآئِقَةُ ٱلْمَوْتِ ۗ وَنَبْلُوكُم بِٱلشَّرِّ وَٱلْخَيْرِ فِتْنَةً ۖ وَإِلَيْنَا تُرْجَعُونَ ﴿٣٥﴾

Ilaahay wuxuu ka warrami awooddiisa weyn iyo in cirka, dhulka, ahaayeen kuwo isku dhaggan Alle ayaana ka keenay roobka iyo doogga, wax kastoo noolna biyo ka ahaaday, dhulkana buura yeelay si dhulka loogu sugo, looguna taago, cirkana ka yeelay saanqaaf ilaashan, habeenka, dharaarta, qorraxda iyo dayaxana falaggood iyo meeshooda u sahlay. Tan kale cid waari oo dad ah ma jirto, ee ruux walba wuu dhiman, waxaase loo baahan yahay camal fiican ee ma habboona in geerida cidda wanaagga fali la jeclaado.

Rasuulkana (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) waxaa laga wariyey: wax walba waxaa laga abuuray biyo. Waxaa wariyey Imaam Axmed. (Sanadkiisana wax baa laga sheegey).

Ibnu Cabaasna wuxuu yidhi: waxaa laysku imtixaami shar, dhibaato, barwaaqo, caafimaad, cudur, hodan, saboolnimo, xalaal, xaaraan, daaco, macsiyo, hanuun iyo baadi. **[Al-Anbiyaa': 30-35].**

36. Markay ku arkaan kuwii gaaloobay waxay kaa yeeshaan jeesjees iyagoo dhihi ma kanaa kan wax ka sheegi ilaahyihiinna iyagoo ka gaaloobi xusidda Allaha Raxmaana.

وَإِذَا رَءَاكَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓا۟ إِن يَتَّخِذُونَكَ إِلَّا هُزُوًا أَهَٰذَا ٱلَّذِى يَذْكُرُ ءَالِهَتَكُمْ وَهُم بِذِكْرِ ٱلرَّحْمَٰنِ هُمْ كَٰفِرُونَ ﴿٣٦﴾

خُلِقَ ٱلْإِنسَٰنُ مِنْ عَجَلٍ ۚ سَأُوْرِيكُمْ ءَايَٰتِى فَلَا تَسْتَعْجِلُونِ ﴿٣٧﴾

37. Waxaa laga abuuray dadka deg deg (oo dabeecad u ah), waxaana idin tusin aayaadkayga ee ha degdegina.

وَيَقُولُونَ مَتَىٰ هَٰذَا ٱلْوَعْدُ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٣٨﴾

38. Waxay dhihi waa goorma yaboohii (cadaabku) haddaad run sheegaysaan.

لَوْ يَعْلَمُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ حِينَ لَا يَكُفُّونَ عَن وُجُوهِهِمُ ٱلنَّارَ وَلَا عَن ظُهُورِهِمْ وَلَا هُمْ يُنصَرُونَ ﴿٣٩﴾

39. Hadday ogyihiin kuwii gaaloobay markaan laga reebeyn wajiyadooda naarta iyo dhabarkooda oon loona gargaarayn (ma degdegsadeen).

بَلْ تَأْتِيهِم بَغْتَةً فَتَبْهَتُهُمْ فَلَا يَسْتَطِيعُونَ رَدَّهَا وَلَا هُمْ يُنظَرُونَ ﴿٤٠﴾

40. Waxayse ugu imaan (naartu) si kada ah wayna wareerin, mana karayaan celinteeda, lamana sugo.

وَلَقَدِ ٱسْتُهْزِئَ بِرُسُلٍ مِّن قَبْلِكَ فَحَاقَ بِٱلَّذِينَ سَخِرُوا۟ مِنْهُم مَّا كَانُوا۟ بِهِۦ يَسْتَهْزِءُونَ ﴿٤١﴾

41. Waxaa lagu jees jeesay rasuullo kaa horreeyey waxaana ku dhacay kuwii ku jees jeesay oo gaalada ah waxay ku jees jeesi jireen.

قُلْ مَن يَكْلَؤُكُم بِٱلَّيْلِ وَٱلنَّهَارِ مِنَ ٱلرَّحْمَٰنِ ۚ بَلْ هُمْ عَن ذِكْرِ رَبِّهِم مُّعْرِضُونَ ﴿٤٢﴾

42. Waxaad dhahdaa yaa idinka ilaalin habeen iyo dharaarba Allaha Raxmaana waxayse iyagu ka jeedsan xusidda Allahood.

أَمْ لَهُمْ ءَالِهَةٌ تَمْنَعُهُم مِّن دُونِنَا ۚ لَا يَسْتَطِيعُونَ نَصْرَ أَنفُسِهِمْ وَلَا هُم مِّنَّا يُصْحَبُونَ ﴿٤٣﴾

43. Ma waxaa u sugnaaday ilaahyo naga celin, ma karaan (waxay caabudi) gargaarka naftooda, nalagamana magan galiyo.

Ma habboona in cid xaqa u yeedhi lagu jees jeeso, iyadoo xaqa la diidi. Dabeecadda dadkana waxaa ka mid ah inay dag dagaan oo wax dheeraystaan, waxaase imaan maalin gaalo wax cadaab ka baajin jirin, cadaabna ugu imaan kado, oyna arki cidhibta xumaanta, wax Alle dadka ka ilaalinna ma jiro habeen iyo maalin midna, wax Alle ka soo hadhay oo wax reebina ma jiro, maxaa

yeelay iyagaanba naftooda wax u tarin, hadalkana wuxuu ku uruursan yahay awoodda Alle, tabar yari iyo baahida dadka. **[Al-Anbiyaa': 36-43].**

بَلْ مَتَّعْنَا هَـٰٓؤُلَآءِ وَءَابَآءَهُمْ حَتَّىٰ طَالَ عَلَيْهِمُ ٱلْعُمُرُ ۗ أَفَلَا يَرَوْنَ أَنَّا نَأْتِى ٱلْأَرْضَ نَنقُصُهَا مِنْ أَطْرَافِهَآ ۚ أَفَهُمُ ٱلْغَٰلِبُونَ ﴿٤٤﴾

44. Saas ma aha ee waxaan u raaxaynay kuwaas iyo aabayaalkood intuu ku dheeraado cimrigu, miyeyna arkayn inaannu ku imanayno dhulka annagoo nusqaamin (guusha islaamka), miyagaa adag.

قُلْ إِنَّمَآ أُنذِرُكُم بِٱلْوَحْىِ ۚ وَلَا يَسْمَعُ ٱلصُّمُّ ٱلدُّعَآءَ إِذَا مَا يُنذَرُونَ ﴿٤٥﴾

45. Waxaad dhahdaa waxaa uun aan idiinku digi waxyiga, mana maqlo dhagoole dhawaaqa marka loo digi.

وَلَئِن مَّسَّتْهُمْ نَفْحَةٌ مِّنْ عَذَابِ رَبِّكَ لَيَقُولُنَّ يَٰوَيْلَنَآ إِنَّا كُنَّا ظَٰلِمِينَ ﴿٤٦﴾

46. Hadduu taabto wax yar oo cadaabka Allehaa ah waxay odhan halaaggannagee annagaa daalimiin ah.

وَنَضَعُ ٱلْمَوَٰزِينَ ٱلْقِسْطَ لِيَوْمِ ٱلْقِيَٰمَةِ فَلَا تُظْلَمُ نَفْسٌ شَيْـًٔا ۖ وَإِن كَانَ مِثْقَالَ حَبَّةٍ مِّنْ خَرْدَلٍ أَتَيْنَا بِهَا ۗ وَكَفَىٰ بِنَا حَٰسِبِينَ ﴿٤٧﴾

47. Waxaannu u dejinaynaa miisaanka caadilka ah maalinta qiyaame lagamana dulmiyo naf waxba, haba ahaado wax la eg xabbad khardal ah (wax yar) ee waan siinaynaa, annagaana ugu filan xisaabiye.

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا مُوسَىٰ وَهَٰرُونَ ٱلْفُرْقَانَ وَضِيَآءً وَذِكْرًا لِّلْمُتَّقِينَ ﴿٤٨﴾

48. Dhab ahaan yaan u siinnay (Nabi) Muuse iyo (Nabi) Haaruun kala bixiye (tawreed) iyo nuur iyo waanada kuwo dhawrsada.

ٱلَّذِينَ يَخْشَوْنَ رَبَّهُم بِٱلْغَيْبِ وَهُم مِّنَ ٱلسَّاعَةِ مُشْفِقُونَ ﴿٤٩﴾

49. Oo ah kuwa ka cabsada Rabbigood iyagoo kali ah, iyagoo saacadda (qiyaame) ka cabsan.

50. Kan (quraankuna) waa quraan la barakeeyey oon soo dejinnay ee midinkaa diidi isaga.

وَهَٰذَا ذِكْرٌ مُّبَارَكٌ أَنزَلْنَٰهُ ۚ أَفَأَنتُمْ لَهُۥ مُنكِرُونَ ﴿٥٠﴾

Gaalada waxaa xumaanta ku qaaday ku raaxaysiga adduunka, waase inay ku waano qaataan faafidda islaamka iyo guusha. Waxaase jirta inaan cid dhuntay la hanuunin karin, markuuse taabto ciqaab yar yey calaalacalaan oo dhawaaqaan, Alle ayaase miisaan caddaalada joojin maalinta qiyaame, cid la dulminna ma jirto, Alle ayaana ku filan xisaab. Nabi Muuse iyo Nabi Haaruunna wuxuu siiyey Alle kitaabkii tawreed, oy ku hanuuniyeen kuwa Alle ka yaaba, quraankuna waa kitaab la barakeeyey ciddii diidda umbaase khasaartay oo dhuntay, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: laba kalimo oo u fudud carrabka kuna culus miisaanka Alle na jecel yahay waa: waxaa nasahan oo mahadsan Allaah, waxaa nasahan Allaha weyn. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim. **[Al-Anbiyaa': 44-50].**

51. Dhab ahaan waxaan u siinnay Nabi Ibraahim hanuunkiisa mar hore annagaana ogayn.

* وَلَقَدْ ءَاتَيْنَآ إِبْرَٰهِيمَ رُشْدَهُۥ مِن قَبْلُ وَكُنَّا بِهِۦ عَٰلِمِينَ ﴿٥١﴾

52. Markuu ku yidhi aabihiis iyo qoomkiisii waa maxay sawirradan aad ku kor negidihiin (caabudaysaan).

إِذْ قَالَ لِأَبِيهِ وَقَوْمِهِۦ مَا هَٰذِهِ ٱلتَّمَاثِيلُ ٱلَّتِىٓ أَنتُمْ لَهَا عَٰكِفُونَ ﴿٥٢﴾

53. Waxay dheheen waxaan hellay aabayaalkanno oo caabudi.

قَالُوا۟ وَجَدْنَآ ءَابَآءَنَا لَهَا عَٰبِدِينَ ﴿٥٣﴾

54. Wuxuu yidhi (Nabi) Ibraahim waxaad ku sugan tihiin (kuna sugneydeen) idinka iyo aabayaalkiin baadi cad.

قَالَ لَقَدْ كُنتُمْ أَنتُمْ وَءَابَآؤُكُمْ فِى ضَلَٰلٍ مُّبِينٍ ﴿٥٤﴾

55. Waxay dheheen ma waxaad noola timid xaq mise adigu waxaad ka mid tahay kuwa ciyaari.

قَالُوٓا۟ أَجِئْتَنَا بِٱلْحَقِّ أَمْ أَنتَ مِنَ ٱللَّٰعِبِينَ ﴿٥٥﴾

56. Wuxuuna yidhi Allihiin waa Rabbiga samooyinka iyo dhulka ee ah kan abuuray, aniguna arrintaas yaan ka mid ahay kuwa ka marag kici.

قَالَ بَل رَّبُّكُمْ رَبُّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ٱلَّذِى فَطَرَهُنَّ وَأَنَا۠ عَلَىٰ ذَٰلِكُم مِّنَ ٱلشَّٰهِدِينَ ﴿٥٦﴾

57. Allaan ku dhaartaye waan dhagri sanamyadiinna ka dib markaad jeedsataan idinkoo tagi.

وَتَٱللَّهِ لَأَكِيدَنَّ أَصْنَٰمَكُم بَعْدَ أَن تُوَلُّوا۟ مُدْبِرِينَ ﴿٥٧﴾

58. Wuxuuna ka yeelay burbur, koodii waynaa mooyee inay xaggiisa u noqdaan (inuu jajabiyey isagu).

فَجَعَلَهُمْ جُذَٰذًا إِلَّا كَبِيرًا لَّهُمْ لَعَلَّهُمْ إِلَيْهِ يَرْجِعُونَ ﴿٥٨﴾

59. Waxay dheheen yaa ku falay sidan ilaahyadannadii kaasi waa daalime.

قَالُوا۟ مَن فَعَلَ هَٰذَا بِـَٔالِهَتِنَآ إِنَّهُۥ لَمِنَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٥٩﴾

60. Waxayna dheheen waxaan maqallay wiil sheegi lana dhaho Ibraahim.

قَالُوا۟ سَمِعْنَا فَتًى يَذْكُرُهُمْ يُقَالُ لَهُۥٓ إِبْرَٰهِيمُ ﴿٦٠﴾

61. Waxay dheheen keena dadka indhihiisa inay ka marag furaan.

قَالُوا۟ فَأْتُوا۟ بِهِۦ عَلَىٰٓ أَعْيُنِ ٱلنَّاسِ لَعَلَّهُمْ يَشْهَدُونَ ﴿٦١﴾

Nabi Ibraahim Alle ayaa hanuuniyey mar hore, wuxuuna ka reebay qoomkiisii iyo aabihiisba waxay caabudayeen ee Alle ka soo hadhay, wayse ku madax adaygeen inkastoos u caddeeyey kalinnimada Alle iyo awooddiisa, markuu ka daalayna wuxuu jajabiyey waxay caabudayeen kii u weynaa mooyee inay u noqdaan isaga, markay is warsadeen cidda saas yeeshayna waxay isu sheegeen inuu Ibraahim yahay, waxayna hor keeneen dadkii si loo arko oo loogu marag furo. **[Al-Anbiyaa': 51-61].**

62. Waxay dheheen gaaladii maadaa ku falay sidan ilaahyadannada Ibraahimow.

قَالُوٓا۟ ءَأَنتَ فَعَلْتَ هَٰذَا بِـَٔالِهَتِنَا يَٰٓـَٔابْرَٰهِيمُ ﴿٦٢﴾

63. Wuxuu yidhi waxaa falay kooda weyn ee kana, waydiiya hadday hadli.

قَالَ بَلْ فَعَلَهُۥ كَبِيرُهُمْ هَٰذَا فَسْـَٔلُوهُمْ إِن كَانُوا۟ يَنطِقُونَ ﴿٦٣﴾

64. Markaasay u noqdeen naftooda waxayna isu dhaheen war idinkaa daalimiina.

فَرَجَعُوٓا۟ إِلَىٰٓ أَنفُسِهِمْ فَقَالُوٓا۟ إِنَّكُمْ أَنتُمُ ٱلظَّٰلِمُونَ ﴿٦٤﴾

ثُمَّ نُكِسُواْ عَلَىٰ رُءُوسِهِمْ لَقَدْ عَلِمْتَ
مَا هَٰٓؤُلَآءِ يَنطِقُونَ ﴿٦٥﴾

65. Markaasaa loo gadiyey madaxooda (waxayna dhaheen) dhab baad u ogtahay inayna kuwani hadlayn

قَالَ أَفَتَعْبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ مَا لَا
يَنفَعُكُمْ شَيْـًٔا وَلَا يَضُرُّكُمْ ﴿٦٦﴾

66. Wuxuu yidhi: ma waxaad caabudaysaan Alle ka sokow waxaan idin anfacayn waxba idinna dhibayn.

أُفٍّ لَّكُمْ وَلِمَا تَعْبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ ۖ
أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿٦٧﴾

67. Ufbaa laydin yidhi idinka iyo waxaad caabudaysaan Alle ka sokow miyeydaan wax kaseyn.

قَالُواْ حَرِّقُوهُ وَٱنصُرُوٓاْ ءَالِهَتَكُمْ إِن
كُنتُمْ فَٰعِلِينَ ﴿٦٨﴾

68. Waxay dhaheen guba una gargaara ilaahyadiinna haddaad wax falaysaan.

قُلْنَا يَٰنَارُ كُونِى بَرْدًا وَسَلَٰمًا عَلَىٰٓ
إِبْرَٰهِيمَ ﴿٦٩﴾

69. Waxaan nidhi naaray u noqo qabow iyo nabadgalyo Ibraahim.

وَأَرَادُواْ بِهِۦ كَيْدًا فَجَعَلْنَٰهُمُ
ٱلْأَخْسَرِينَ ﴿٧٠﴾

70. Waxay la dooneen dhagar waxaanna ka yeellay kuwo khasaaray.

Nabi Ibraahim markuu ka gar helay gaaladii hadal cadna ku yidhi yey goosteen inay gubaan oo dab ku tuuraan, taasina waa caadada jaahiliinta in marka laga gar helo ay mu'miniinta ku jeedsadaan xumaanna u maamulaan, Alle ayaase ka nabadgaliyey dhagartii, kana koriyey dabkii, gaaladii iyo waxay caabudayeenna khasaare ku dambaysiiyey, wuxuuna xusay Nabi Ibraahim Alle markii lagu tuuray dabka. Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: (waxaa i kaafiya Alle isagaana u fiican wakiil) waxaa yidhi Nabi Ibraahim markii dabka lagu tuuray, Nabiga Muxamed ahna Alle ha nabadgaliyee markii lagu yidhi dadkii baa idiin kulmay. Waxaa wariyey Bukhaari.

Taasina waxay ku tusin in xaqu sarrayn guulaysanna markii si dhab ah Alle loogu xidhnaado lana caabudo. **[Al-Anbiyaa': 62-70].**

وَنَجَّيْنَٰهُ وَلُوطًا إِلَى ٱلْأَرْضِ ٱلَّتِى بَٰرَكْنَا
فِيهَا لِلْعَٰلَمِينَ ﴿٧١﴾

71. Waannu u korinnay (Nabi) Ibraahim iyo Nabi Luud dhulkii aan u barakaynay caalamka (shaam).

72. Waxaan siinnay Isxaaq iyo Yacquub oo siyaada ah, waxaanna ka yeellay dhammaan kuwo suubban.

وَوَهَبْنَا لَهُۥٓ إِسْحَٰقَ وَيَعْقُوبَ نَافِلَةً ۖ وَكُلًّا جَعَلْنَا صَٰلِحِينَ ﴿٧٢﴾

73. Waxaanna ka yeellay imaamyo ku hanuuniya amarkannaga, waxaanna u waxyoonay falidda khayrka, oogidda salaadda iyo bixinta sakada, waxayna ahaayeen kuwo na caabuda.

وَجَعَلْنَٰهُمْ أَئِمَّةً يَهْدُونَ بِأَمْرِنَا وَأَوْحَيْنَآ إِلَيْهِمْ فِعْلَ ٱلْخَيْرَٰتِ وَإِقَامَ ٱلصَّلَوٰةِ وَإِيتَآءَ ٱلزَّكَوٰةِ ۖ وَكَانُوا۟ لَنَا عَٰبِدِينَ ﴿٧٣﴾

74. (Nabi) Luudna waxaan siinnay xukun iyo cilmi, waxaanna ka korinnay magaalaadii ahayd mid fasha xumo, waxay ahaayeen qoom xun oo faasinqiina.

وَلُوطًا ءَاتَيْنَٰهُ حُكْمًا وَعِلْمًا وَنَجَّيْنَٰهُ مِنَ ٱلْقَرْيَةِ ٱلَّتِى كَانَت تَّعْمَلُ ٱلْخَبَٰٓئِثَ ۚ إِنَّهُمْ كَانُوا۟ قَوْمَ سَوْءٍ فَٰسِقِينَ ﴿٧٤﴾

75. Waxaanna galinnay naxariistannada, wuxuuna ka mid ahaa kuwa suubban.

وَأَدْخَلْنَٰهُ فِى رَحْمَتِنَآ ۖ إِنَّهُۥ مِنَ ٱلصَّٰلِحِينَ ﴿٧٥﴾

76. (Nabi) Nuuxna waa korinnay, markuu dhawaaqay mar hore, waana ajiibnay, waana ka korinnay isaga iyo ehelkiisaba murugadii waynayd.

وَنُوحًا إِذْ نَادَىٰ مِن قَبْلُ فَٱسْتَجَبْنَا لَهُۥ فَنَجَّيْنَٰهُ وَأَهْلَهُۥ مِنَ ٱلْكَرْبِ ٱلْعَظِيمِ ﴿٧٦﴾

77. Waana uga gargaarray qoomkii beeniyey aayaadkannaga, waxayna ahaayeen qoom xun, waana maanshaynay dhammaantood.

وَنَصَرْنَٰهُ مِنَ ٱلْقَوْمِ ٱلَّذِينَ كَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَآ ۚ إِنَّهُمْ كَانُوا۟ قَوْمَ سَوْءٍ فَأَغْرَقْنَٰهُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٧٧﴾

Aayadahanna waxay ka warrami qaar ka mid ah Nabiyadii sida Nabi Ibraahim, Luud, Isxaaq, Yacquub iyo Nuux, iyo sida Alle uga koriyey qoomamkoodii daalimiinta ahaa ee xaqa ka jeedsaday kana madax adaygay, cidhibtii fiicnaydna waxay u hadhay Nabiyadii iyo mu'miniintii xaqa ku raacday, khasaare iyo halaagna wuxuu u dambeeyey gaaladii xaqa diiday. Warka Nabiyadaasna meelo badan oo quraanka ah yuu ku faah faahsan yahay, waxaase muhiim ah in lagu waano qaato xaqana la raaco. **[Al-Anbiyaa': 71-77].**

وَدَاوُۥدَ وَسُلَيۡمَٰنَ إِذۡ يَحۡكُمَانِ فِي ٱلۡحَرۡثِ إِذۡ نَفَشَتۡ فِيهِ غَنَمُ ٱلۡقَوۡمِ وَكُنَّا لِحُكۡمِهِمۡ شَٰهِدِينَ ٧٨

78. Xusuuso (Nabi) Daawuud iyo (Nabi) Suleymaan markay xukumayeen beerta markuu daaqay adhi qoom (dad), waxaanna ahayn kuwa xukunkooda u maraga (arka).

فَفَهَّمۡنَٰهَا سُلَيۡمَٰنَۚ وَكُلًّا ءَاتَيۡنَا حُكۡمٗا وَعِلۡمٗاۚ وَسَخَّرۡنَا مَعَ دَاوُۥدَ ٱلۡجِبَالَ يُسَبِّحۡنَ وَٱلطَّيۡرَۚ وَكُنَّا فَٰعِلِينَ ٧٩

79. Waxaanna fahansiinnay Sulaymaan, dhammaanna waxaan siinnay xukun iyo cilmi, waxaanna u sakhirray Daawuud buuraha iyagoo la tasbiixsan iyo shimbiraha, waanna fallaa «oo karraa sakhiraaddaas».

وَعَلَّمۡنَٰهُ صَنۡعَةَ لَبُوسٖ لَّكُمۡ لِتُحۡصِنَكُم مِّنۢ بَأۡسِكُمۡۖ فَهَلۡ أَنتُمۡ شَٰكِرُونَ ٨٠

80. Waxaanna barray Daawuud samaynta duruucda inay idinka dhawrto dagaalkiinna, ee ma tihiin kuwo mahadin.

وَلِسُلَيۡمَٰنَ ٱلرِّيحَ عَاصِفَةٗ تَجۡرِي بِأَمۡرِهِۦٓ إِلَى ٱلۡأَرۡضِ ٱلَّتِي بَٰرَكۡنَا فِيهَاۚ وَكُنَّا بِكُلِّ شَيۡءٍ عَٰلِمِينَ ٨١

81. Suleymaanna waxaan u sakhirray dabaysha iyadoo daran oo ku socota amarkiisa xaggii dhulkii ahaa kaan barakaynay dhexdiisa, waxaanna nahay kuwo wax walba og.

وَمِنَ ٱلشَّيَٰطِينِ مَن يَغُوصُونَ لَهُۥ وَيَعۡمَلُونَ عَمَلٗا دُونَ ذَٰلِكَۖ وَكُنَّا لَهُمۡ حَٰفِظِينَ ٨٢

82. Shaydaammadana, waxaan uga sakhirray kuwo u dhumban (badda), una fala camal aan kaas ahayn, anaggaana ilaalinna.

Sidoo kale Daawuud iyo wiilkiisii Nabi Sulaymaan iyagana quraanku meeluu kaga hadlay, mid walbana wuxuu Alle siiyey xukun iyo cilmi, waxaana loo sahlay Daawuud: buuraha, shimbiraha iyo sameynta qalabka dagaalka, sidoo kale waxaa loo fududeeyey Nabi Suleymaan: dabaysha oo ku socon amarkiisa iyo shayaadiinta kuwo ka shaqeeya bad iyo shaqa kalaba. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: garsoorayaashu waa seddex, mid jannaduu gali, labana naarta, midka xaqa yaqaan oo xukuma jannaduu

gali, mid jaahilnimo wax ku xukuma naartuu gali, mid xaqa yaqaan oo xukuma wax ka duwanna naartuu gali. Taasina waxay ku tusin ahmiyadda caddaaladda iyo in dadku ku qaybsami, ama janno ama naar. **[Al-Anbiyaa': 78-82].**

* وَأَيُّوبَ إِذْ نَادَىٰ رَبَّهُۥٓ أَنِّى مَسَّنِىَ ٱلضُّرُّ وَأَنتَ أَرْحَمُ ٱلرَّٰحِمِينَ ﴿٨٣﴾

83. (Xusuuso) Ayuubna markuu u dhawaaqay Allehiis (isagoo dhihi) aniga waxaa i taabtay dhib adiguna waxaad tahay naxariis badane.

فَٱسْتَجَبْنَا لَهُۥ فَكَشَفْنَا مَا بِهِۦ مِن ضُرٍّ ۖ وَءَاتَيْنَٰهُ أَهْلَهُۥ وَمِثْلَهُم مَّعَهُمْ رَحْمَةً مِّنْ عِندِنَا وَذِكْرَىٰ لِلْعَٰبِدِينَ ﴿٨٤﴾

84. Waana ajiibnay waxaanna ka faydnay waxa haya oo dhiba, waxaanna siinnay ehelkiisii iyo wax la mid ah naxariis xaggannaga ah darteed iyo waanada caalamka.

وَإِسْمَٰعِيلَ وَإِدْرِيسَ وَذَا ٱلْكِفْلِ ۖ كُلٌّ مِّنَ ٱلصَّٰبِرِينَ ﴿٨٥﴾

85. Xusuuso Ismaaciil, Idiriis, Dulkifli, dhammaan waxay ka mid ahaayeen kuwa samra.

وَأَدْخَلْنَٰهُمْ فِى رَحْمَتِنَآ ۖ إِنَّهُم مِّنَ ٱلصَّٰلِحِينَ ﴿٨٦﴾

86. Waxaanna dhex galinnay naxariistannada waxayna ka mid ahaayeen kuwa suubban.

وَذَا ٱلنُّونِ إِذ ذَّهَبَ مُغَٰضِبًا فَظَنَّ أَن لَّن نَّقْدِرَ عَلَيْهِ فَنَادَىٰ فِى ٱلظُّلُمَٰتِ أَن لَّآ إِلَٰهَ إِلَّآ أَنتَ سُبْحَٰنَكَ إِنِّى كُنتُ مِنَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٨٧﴾

87. Nabi Yuunus (xusuuso) markuu tagay isagoo cadhaysan una maleeyey inaannaan cidhiidhyayn korkiisa oo uu ku dhawaaqay mugdiyada dhexdooda ilaah xaq lugu cabudoo aan adi ahayn ma jiro, nasahnaantaada anigu waxaan ka mid ahaa kuwa daalimiinta ah.

فَٱسْتَجَبْنَا لَهُۥ وَنَجَّيْنَٰهُ مِنَ ٱلْغَمِّ ۚ وَكَذَٰلِكَ نُنجِى ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٨٨﴾

88. Waana ajiibnay kana korinnay murugtii, saasaanna u korinnaa mu'miniinta.

89. Zakariyana (xusuuso) markuu u dhawaaqay Allehiis isagoo leh Allow hayga tagin anoo kali ah adaa u khayr roon cid wax dhaxashee «u hadhee».

وَزَكَرِيَّآ إِذْ نَادَىٰ رَبَّهُۥ رَبِّ لَا تَذَرْنِى فَرْدًا وَأَنتَ خَيْرُ ٱلْوَٰرِثِينَ ﴿٨٩﴾

90. Waanna ajiibnay waxaanna siinnay Yaxye, waxaanna u hagaajinnay haweenaydiisii, waxayna ahaayeen kuwo u deg dega khayraadka oo na barya iyagoo rajayn oo cabsan, waxayna ahaayeen kuwa noo khushuuca.

فَٱسْتَجَبْنَا لَهُۥ وَوَهَبْنَا لَهُۥ يَحْيَىٰ وَأَصْلَحْنَا لَهُۥ زَوْجَهُۥٓ ۚ إِنَّهُمْ كَانُوا۟ يُسَٰرِعُونَ فِى ٱلْخَيْرَٰتِ وَيَدْعُونَنَا رَغَبًا وَرَهَبًا ۖ وَكَانُوا۟ لَنَا خَٰشِعِينَ ﴿٩٠﴾

Aayadahan waxay ka warrami xaalkii Nabiyadaas iyo sida Alle u ajiibay dhammaantood ugana koriyey dhibkii, saasaana Alle u aqbalaa baryada dadka dhibban ee wanwanaagsan, waxaana shardi ah in si dhab ah loo caabudo Alle looguna hoggaansamo, xaqana la raaco xumaanna laga fogaado. **[Al-Anbiyaa': 83-90].**

91. Tiina (xusuuso) dhawrtay xubinteeda waa (Maryama) oon ku afuufnay dhexdeeda ruuxdannadii ugana yeelnay caalamka iyada iyo wiilkeeda calaamad.

وَٱلَّتِىٓ أَحْصَنَتْ فَرْجَهَا فَنَفَخْنَا فِيهَا مِن رُّوحِنَا وَجَعَلْنَٰهَا وَٱبْنَهَآ ءَايَةً لِّلْعَٰلَمِينَ ﴿٩١﴾

92. Tani waa diintiinnii waana diin kaliya aniguna waxaan ahay Allihiin ee i caabuda.

إِنَّ هَٰذِهِۦٓ أُمَّتُكُمْ أُمَّةً وَٰحِدَةً وَأَنَا۠ رَبُّكُمْ فَٱعْبُدُونِ ﴿٩٢﴾

93. Waxayse isku khilaafeen amarkoodii dhexdooda, dhammaanna xaggaygaa loo soo celin.

وَتَقَطَّعُوٓا۟ أَمْرَهُم بَيْنَهُمْ ۖ كُلٌّ إِلَيْنَا رَٰجِعُونَ ﴿٩٣﴾

94. Ruuxii fala wanaag isagoo mu'min ah lagama qariyo camalkiisa, annaguna waan u qoraynaa.

فَمَن يَعْمَلْ مِنَ ٱلصَّٰلِحَٰتِ وَهُوَ مُؤْمِنٌ فَلَا كُفْرَانَ لِسَعْيِهِۦ وَإِنَّا لَهُۥ كَٰتِبُونَ ﴿٩٤﴾

95. Waxaa ka reebban magaalo aan halaagnay inay soo noqoto «soo bixin ka hor».

وَحَرَٰمٌ عَلَىٰ قَرْيَةٍ أَهْلَكْنَٰهَآ أَنَّهُمْ لَا يَرْجِعُونَ ﴿٩٥﴾

96. Marka la furo oo la soo daayo yaajuuj iyo maajuuj iyagoo jaho sarreysa dhaammanteed ka soo deg degi.

حَتَّىٰٓ إِذَا فُتِحَتْ يَأْجُوجُ وَمَأْجُوجُ وَهُم مِّن كُلِّ حَدَبٍ يَنسِلُونَ ﴿٩٦﴾

97. Waxaa dhawaaday yaboohii xaqa ahaa waxaana soo bixi inay taagnaan indhaha kuwa gaaloobay (iyagoo dhihi) halaagannagee waxaan kaga sugnayn halmaansho kan waxaanse ahayn daalimiin.

وَٱقْتَرَبَ ٱلْوَعْدُ ٱلْحَقُّ فَإِذَا هِىَ شَٰخِصَةٌ أَبْصَٰرُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ يَٰوَيْلَنَا قَدْ كُنَّا فِى غَفْلَةٍ مِّنْ هَٰذَا بَلْ كُنَّا ظَٰلِمِينَ ﴿٩٧﴾

Maryam bintu Cimraanna wax badan yuu quraanku ka warramay sharafteedii iyo sida Alle u dhawray ugana yeelay iyada iyo wiilkeedii aayad iyo calaamad caalamka. Alle na waa kali wuxuuna mutaa in isaga uun la caabudo, dadkiise way kala tageen oo iskhilaafeen. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: annagu Nabiyada haddaan nahay diintannadu waa mid (kaliya). Taasoo macnaheedu yahay in waxyaabaha waaweyn diinuhu iskaga mid yihiin. Alle ayaase loo noqon cid walbana ka abaal marin waxay kasbatay, cid la halaagayna adduunka uma soo noqoto inta dadka laga soo bixin oo qiyaame la gaadhi oo ay ka soo bixi yaajuuj iyo maajuuj oo waqtigu ka dhawaado, markaasoo kuwa gaaloobay ay indha taagi iyagoo sheegi inay halaagsameen daalimiinna ahaayeen halmaanshana kaga sugnaayeen qiyaamada, waxse ma taro calaacal waqtigaas ee waxaa wax tari wanaaggii la hormarsaday. **[Al-Anbiyaa': 91-97].**

98. Idinka iyo waxaad caabudaysaan oo Alle ka soo hadhay waxay noqon shidaalka jahannamo idinkuna waad ku arooraysaan.

إِنَّكُمْ وَمَا تَعْبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ حَصَبُ جَهَنَّمَ أَنتُمْ لَهَا وَٰرِدُونَ ﴿٩٨﴾

99. Hadday yihiin kuwaasu ilaahyo kuma arooreen, dhammaanna way ku waari.

لَوْ كَانَ هَٰٓؤُلَآءِ ءَالِهَةً مَّا وَرَدُوهَا ۖ وَكُلٌّ فِيهَا خَٰلِدُونَ ﴿٩٩﴾

لَهُمْ فِيهَا زَفِيرٌ وَهُمْ فِيهَا لَا يَسْمَعُونَ ﴿١٠٠﴾

100. Waxay ku yeelan dhexdeeda qaylo, waxna dhexdeeda kuma maqlaan.

إِنَّ ٱلَّذِينَ سَبَقَتْ لَهُم مِّنَّا ٱلْحُسْنَىٰٓ أُوْلَٰٓئِكَ عَنْهَا مُبْعَدُونَ ﴿١٠١﴾

101. Kuway u hor martay xaggannaga wanaag kuwaasu xaggeeda waa laga fogayn.

لَا يَسْمَعُونَ حَسِيسَهَا ۖ وَهُمْ فِى مَا ٱشْتَهَتْ أَنفُسُهُمْ خَٰلِدُونَ ﴿١٠٢﴾

102. Mana maqlaan shanqadhteeda iyaguna waxay doonto naftoodu yey ku waari.

لَا يَحْزُنُهُمُ ٱلْفَزَعُ ٱلْأَكْبَرُ وَتَتَلَقَّىٰهُمُ ٱلْمَلَٰٓئِكَةُ هَٰذَا يَوْمُكُمُ ٱلَّذِى كُنتُمْ تُوعَدُونَ ﴿١٠٣﴾

103. Mana walbahaariyo argagaxii waynaa, waxayna kula kulmi malaa'igtu kani waa maalintiinnii ah tii laydiin yaboohay.

يَوْمَ نَطْوِى ٱلسَّمَآءَ كَطَىِّ ٱلسِّجِلِّ لِلْكُتُبِ ۚ كَمَا بَدَأْنَآ أَوَّلَ خَلْقٍ نُّعِيدُهُۥ ۚ وَعْدًا عَلَيْنَآ ۚ إِنَّا كُنَّا فَٰعِلِينَ ﴿١٠٤﴾

104. Waana maalintaan u duubayno samada sida loo duubo warqadaha kitaabka, sidaan ku billownay abuuriddii hore yaanna ku soo celinaynaa, waa yabooh korkannaga ah, annagaana falna saas.

وَلَقَدْ كَتَبْنَا فِى ٱلزَّبُورِ مِنۢ بَعْدِ ٱلذِّكْرِ أَنَّ ٱلْأَرْضَ يَرِثُهَا عِبَادِىَ ٱلصَّٰلِحُونَ ﴿١٠٥﴾

105. Dhab ahaan waxaan ugu qorray Zabuur sheegid ka dib (looxul maxfuudka) dhulka waxaa dhaxli addoomadayda suubban.

إِنَّ فِى هَٰذَا لَبَلَٰغًا لِّقَوْمٍ عَٰبِدِينَ ﴿١٠٦﴾

106. Kan gaadhsiin baa ugu sugan ciddii caabudi (Alle).

وَمَآ أَرْسَلْنَٰكَ إِلَّا رَحْمَةً لِّلْعَٰلَمِينَ ﴿١٠٧﴾

107. Kumana aannaan dirin naxariista caalamka adoo ah mooyee.

Ciddii wax Alle ka soo hadhay caabudda iyo cidday caabudeen ba oo ka raalli ah waxay noqon shidaalka naarta, ciddii wanaag ugu hor maray Alle waa laga fogayn, mana maqlo shanqadheeda, wuxuu doonana jannaduu ka helaa, mana ka naxo argaggaxa qiyaamada, malaa'igtaana u bishaarayn, waana maalinta cirka la duubi, dhulka jannada iyo kan adduunba waxaa u hadhi mu'miniinta

suubban, quraankuna waa gaadhsiin, Rasuulkuna waa naxariista caalamka, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: layma bixinnin anoo wax lacnada ee waxaa uun lay bixiyey anoo naxariis ah. (Muslim). **[Al-Anbiyaa': 98-107].**

قُلْ إِنَّمَا يُوحَىٰٓ إِلَيَّ أَنَّمَآ إِلَٰهُكُمْ إِلَٰهٌ وَٰحِدٌ ۖ فَهَلْ أَنتُم مُّسْلِمُونَ ﴿١٠٨﴾

108. Waxaad dhahdaa waxaa uun lay waxyooday aniga in Ilaahiinna in la caabudo mudan Ilaah kaliya yahay ee idinku muslimiin ma tihiin (hoggaansama).

فَإِن تَوَلَّوْا۟ فَقُلْ ءَاذَنتُكُمْ عَلَىٰ سَوَآءٍ ۖ وَإِنْ أَدْرِىٓ أَقَرِيبٌ أَم بَعِيدٌ مَّا تُوعَدُونَ ﴿١٠٩﴾

109. Haddayse jeedsadaan waxaad dhahdaa waxaan idin ogaysiiyey si siman (cad) colnimo, mana ogi inay dhawdahay ama fogtahay waxa laydiin yaboohay.

إِنَّهُۥ يَعْلَمُ ٱلْجَهْرَ مِنَ ٱلْقَوْلِ وَيَعْلَمُ مَا تَكْتُمُونَ ﴿١١٠﴾

110. Alle wuxuu og yahay waxa lala qaylyo oo hadala wuxuuna og yahay waxaad qarinaysaan.

وَإِنْ أَدْرِى لَعَلَّهُۥ فِتْنَةٌ لَّكُمْ وَمَتَٰعٌ إِلَىٰ حِينٍ ﴿١١١﴾

111. Mana ogi, waxay u dhawdahay inay fidno idiin tahay iyo raaxo tan iyo muddo.

قَٰلَ رَبِّ ٱحْكُم بِٱلْحَقِّ ۗ وَرَبُّنَا ٱلرَّحْمَٰنُ ٱلْمُسْتَعَانُ عَلَىٰ مَا تَصِفُونَ ﴿١١٢﴾

112. Wuxuu yidhi (Nabigu) Allow ku kala xukun (dhexdannada) xaq, Rabbigeenna waa Raxmaan ee looga kaalmo waydiisto waxaad sheegaysaan.

Alle waa kali, isagayna waajib tahay in loo hoggaansamo, ciddiise jeedsata ha ogaato si cad inay Alle iyo Rasuulkiisa la colloowday, kolleyna waa kii gaalo la ciqaabo ama ha dhawaato ama ha dib dhacdo muddee, Alle na waa og yahay wax kasta ama ha la muujiyo ama ha la qarsadee, dib u dhigidda ciqaabtuna waxaa suurowda inay tahay imtixaam iyo u raaxayn muddo.

Alle na isagaa ah xaakimka caadilka ah, sharcigiisaana caadil ah, isagaana looga kaalmo waydiistaa dhibaatada iyo waxay gaaladu sheegi oo xumaan ah. Nabiga iyo Nabiyadii kalaba nabadgalyo Alle korkooda ha yeelee waxay dhihi jireen: Allow caddaalo nagu kala xukun annaga iyo qoomkannaga. **[Al-Anbiyaa': 108-112].**

Suurat Al-Xajj

سُورَةُ الحَجِّ

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ ٱتَّقُواْ رَبَّكُمْۚ إِنَّ زَلْزَلَةَ ٱلسَّاعَةِ شَيْءٌ عَظِيمٌ ﴿١﴾

يَوْمَ تَرَوْنَهَا تَذْهَلُ كُلُّ مُرْضِعَةٍ عَمَّآ أَرْضَعَتْ وَتَضَعُ كُلُّ ذَاتِ حَمْلٍ حَمْلَهَا وَتَرَى ٱلنَّاسَ سُكَٰرَىٰ وَمَا هُم بِسُكَٰرَىٰ وَلَٰكِنَّ عَذَابَ ٱللَّهِ شَدِيدٌ ﴿٢﴾

وَمِنَ ٱلنَّاسِ مَن يُجَٰدِلُ فِي ٱللَّهِ بِغَيْرِ عِلْمٍ وَيَتَّبِعُ كُلَّ شَيْطَٰنٍ مَّرِيدٍ ﴿٣﴾

كُتِبَ عَلَيْهِ أَنَّهُۥ مَن تَوَلَّاهُ فَأَنَّهُۥ يُضِلُّهُۥ وَيَهْدِيهِ إِلَىٰ عَذَابِ ٱلسَّعِيرِ ﴿٤﴾

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

1. Dadaw ka dhawrsada Allihiin maxaa yeelay gilgilashada saacadda (qiyaame) waa wax wayn (daran).
2. Waana maalintaad arkaysaan iyadooy halmaami mid wax nuujisa dhammaanteed waxay nuujinaysay, ooy dejin (tuuri) mid kastoo uur leh uurkeeda, waxaadna arkaysaa dadkoo waalan, mana aha kuwo (dhab) u waalan ee cadaabka Allaa daran.
3. Dadka waxaa ka mid ah ruux ku murmi Alle cilmi la'aan oo raaci shaydaan kastoo madax adag.
4. Waxa loo qoray (shaydaan) ruuxii talada u dhiibta (raaca) inuu baadiyeeyo kuna toosiyo cadaabka.

Suurraddan waxaa lagu magacaabaa suuradda xajka, maxaa yeelay waxay ka warrantay xajka iyo waxa la xidhiidha, waxayna ku billaabatay shiddada qiyaamada iyo inay dadku ka dhawrsadaan dhibaatadaas, waxaana looga dhawrsan camal fiican, dadkuna maalintaas waxay la kulmi arrin wayn inta laga moodo inay waalan yihiin iyagoon waallayn ee waa uun dhibka, wixii ilma ah oo la nuujinhayey ama uurka ku jirayna la tuuro, tan kale ma habboona in cilmi darro lagu doodo Alle iyo diinta, lana raaco shaydaan wax dhumiya, naartana u hoggaamiya.

Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: waxaa laydin soo kulmin qiyaamada idinkoo kaba la' oo qaawan, oon gudnayn, Caa'isha waxay tidhi: Rasuulka Allow ragga iyo haweenku mays dhawri! Markaasuu yidhi Nabigu: Caa'ishoy xaalku waa ka daran yahay in waxaasi shuqliyo. Taasina waxay ku tusin dhibaatada qiyaamada. **[Al-Xajj: 1-4].**

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِن كُنتُمْ فِى رَيْبٍ مِّنَ
ٱلْبَعْثِ فَإِنَّا خَلَقْنَـٰكُم مِّن تُرَابٍ ثُمَّ
مِن نُّطْفَةٍ ثُمَّ مِنْ عَلَقَةٍ ثُمَّ مِن مُّضْغَةٍ
مُّخَلَّقَةٍ وَغَيْرِ مُخَلَّقَةٍ لِّنُبَيِّنَ لَكُمْ ۚ
وَنُقِرُّ فِى ٱلْأَرْحَامِ مَا نَشَآءُ إِلَىٰٓ أَجَلٍ
مُّسَمًّى ثُمَّ نُخْرِجُكُمْ طِفْلًا ثُمَّ لِتَبْلُغُوٓا۟
أَشُدَّكُمْ ۖ وَمِنكُم مَّن يُتَوَفَّىٰ وَمِنكُم
مَّن يُرَدُّ إِلَىٰٓ أَرْذَلِ ٱلْعُمُرِ لِكَيْلَا يَعْلَمَ
مِنۢ بَعْدِ عِلْمٍ شَيْـًٔا ۚ وَتَرَى ٱلْأَرْضَ
هَامِدَةً فَإِذَآ أَنزَلْنَا عَلَيْهَا ٱلْمَآءَ ٱهْتَزَّتْ
وَرَبَتْ وَأَنۢبَتَتْ مِن كُلِّ زَوْجٍۭ بَهِيجٍ ﴿٥﴾

5. Dadow haddaad tihiin kuwo shakisan soo bixinta annagaa idinka abuurray carro, haddana dhibic haddana calaqo, haddana goosin la abuuray iyo midaan la abuurin si aan idiinku caddayno (qudrada Alle), waxaanna ku sugnaa makaanka waxaan doonno tan iyo muddo magacaaban, markaasaan idin soo bixinaynaa idinkoo yar, markaas inaad gaadhaan xooggiinna waxaa idinka mid ah cid la oofsan (dhiman) waxaana idinka mid ah kuwo loo celin cimri liita (gabow) si ayna u garanin intay wax yaqiinneen ka dib waxba, waxaad arkaysaa dhulkoo abaar (dhimaad) ah markaan ku soo dejinno korkeeda biyana way gilgilataa wayna kortaa, waxayna soo bixisaa nooc kastoo quruxsan.

ذَٰلِكَ بِأَنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلْحَقُّ وَأَنَّهُۥ يُحْىِ
ٱلْمَوْتَىٰ وَأَنَّهُۥ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿٦﴾

6. Taasna waxaa ugu wacan in Alle uun xaq yahay uuna nooleeyo waxa dhintay iyo inuu wax walba karo.

وَأَنَّ ٱلسَّاعَةَ ءَاتِيَةٌ لَّا رَيْبَ فِيهَا وَأَنَّ
ٱللَّهَ يَبْعَثُ مَن فِى ٱلْقُبُورِ ﴿٧﴾

7. Iyo in saacadda qiyaame iman shaki la'aan, Alle na wuxuu soo bixin waxa qubuuraha ku sugan.

Dadka kuma habboona inay diidaan soo bixinta maxaa yeelay waxay soo mareen abuurid kala duwan laga bilaabo dhibic ilaa intay ka gaboobaan, arrintaasuna ugu filan waano, waxaa kaloo waano ugu filan roobka iyo doogguu soo bixiyo abaar ka dib, taasina waxay sugi awoodda Alle iyo xaqnimadiisa iyo in qiyaamadu imaan shaki la'aan iyo Alle inuu soo bixin waxa dhintay. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: abuuridda midkiin waxaa lagu kulmiyaa uurka hooyadii afartan dhibic, markaas xinjir in la mid ah, haddana goosin sidoo kale, markaas malag loo bixiyaa waxaana la faraa afar kalimo waxaana la qoraa rizqigiisa, camalkiisa, ajashiisa, xumaan iyo liibaan, markaasaa lagu afuufaa ruuxda. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim.

Taasina waxay ku tusin in dadaal fiican la dadaalo iyadoo la og yahay in Alle wax walba qaddaray. **[Al-Xajj: 5-7].**

وَمِنَ ٱلنَّاسِ مَن يُجَٰدِلُ فِى ٱللَّهِ بِغَيْرِ عِلْمٍ وَلَا هُدًى وَلَا كِتَٰبٍ مُّنِيرٍ ﴿٨﴾

8. Dadka waxaa ka mid ah mid ku doodi Alle cilmi la'aan iyo hanuun la'aan iyo kitaab wax nuurin la'aantiis.

ثَانِىَ عِطْفِهِۦ لِيُضِلَّ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ ۖ لَهُۥ فِى ٱلدُّنْيَا خِزْىٌ ۖ وَنُذِيقُهُۥ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ عَذَابَ ٱلْحَرِيقِ ﴿٩﴾

9. Oo dadbi luqunta (iskibrin) inuu ka dhumiyo jidka Alle, wuxuu mudan adduunyada dulli waxaanna dhadhansiin maalinta qiyaame cadaab wax guba.

ذَٰلِكَ بِمَا قَدَّمَتْ يَدَاكَ وَأَنَّ ٱللَّهَ لَيْسَ بِظَلَّٰمٍ لِّلْعَبِيدِ ﴿١٠﴾

10. Taasna waa waxay hor marsatay gacmahaagu, Alle na ma aha dulmiyaha addoommada.

وَمِنَ ٱلنَّاسِ مَن يَعْبُدُ ٱللَّهَ عَلَىٰ حَرْفٍ ۖ فَإِنْ أَصَابَهُۥ خَيْرٌ ٱطْمَأَنَّ بِهِۦ ۖ وَإِنْ أَصَابَتْهُ فِتْنَةٌ ٱنقَلَبَ عَلَىٰ وَجْهِهِۦ خَسِرَ ٱلدُّنْيَا وَٱلْءَاخِرَةَ ۚ ذَٰلِكَ هُوَ ٱلْخُسْرَانُ ٱلْمُبِينُ ﴿١١﴾

11. Waxaa ka mid ah dadka mid u caabudi (Alle) dhinac (shaki) hadduu soo gaadho khayrna xasili, hadduu soo gaadho imtixaan (dhibna) u gaddooma wajigiisa (gaalooba) wuxuu khasaariyey adduun iyo aakhiraba kaasina waa khasaaraha cad uun.

يَدْعُوا۟ مِن دُونِ ٱللَّهِ مَا لَا يَضُرُّهُۥ وَمَا لَا يَنفَعُهُۥ ۚ ذَٰلِكَ هُوَ ٱلضَّلَٰلُ ٱلْبَعِيدُ ﴿١٢﴾

12. Wuxuu caabudi (baryina) Alle ka sokow waxaan dhibayn anfacaynna kaasina waa uun baadida fog.

13. Wuxuu caabudi wax dhibkiisu ka dhaw yahay nacfigiisu, isagaa u xun sokeeye una xun la noolaadi.

يَدْعُواْ لَمَن ضَرُّهُۥٓ أَقْرَبُ مِن نَّفْعِهِۦ ۚ لَبِئْسَ ٱلْمَوْلَىٰ وَلَبِئْسَ ٱلْعَشِيرُ ﴿١٣﴾

Waxaa ka mid ah dadka kuwo ku murmi Ilaahay cilmi iyo hanuun iyo kitaab cad la'aantiis, ee kibir iyo isla weyni uun la jooga, inay dadka xaqa ka leexiyaan, kuwaasuna waxay mudan dulli adduun iyo cadaab aakhiro, lamana dulmiyin ee waa waxay hor marsatay gacantiisu, waxaa kaloo ka mid ah kuwa Alle u caabudi dhinac oo hadduu khayr helana xasila, haddii dhib ku yimaadana gaalooba, kaasina waa mid iska khasaariyey adduun iyo aakhiraba, waana khasaaraha dhabta ah, wuxuuna caabudi Alle ka sokow waxaan waxba tarayn, dhibkiisuna ka dhaw yahay nacfigiisa, kaasaana u xun sokeeye iyo cashiir. Ibnu Cabbaas wuxuu sheegay in reer baadiyihii carbeed markay khayr helaanna dhihi jireen waa diin fiican marka dhib ku yimaaddana dhihi jireen waa diin xun, markaasaa Alle soo dejiyey aayadahan, diintuna waa uun xaq, ama barwaaqo ha timaaddo ama dhib ha yimaadee. **[Al-Xajj: 8-13].**

14. Ilaahay wuxuu galiyaa kuwa rumeeyey (xaqa) oo falay camal fiican jannooyin ay socoto dhexdeeda wabiyaal, Allana wuxuu falaa wuxuu doono.

إِنَّ ٱللَّهَ يُدْخِلُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ يَفْعَلُ مَا يُرِيدُ ﴿١٤﴾

15. Ciddii u malayn inuusan u gargaarayn Alle Nabigiisa adduun iyo aakhiraba ha u fidiyo xadhig xagga samada hana isku gooyo (marjiyo) hana dayo inay dhagartiisu tegsiiso waxa cadho galin.

مَن كَانَ يَظُنُّ أَن لَّن يَنصُرَهُ ٱللَّهُ فِى ٱلدُّنْيَا وَٱلْءَاخِرَةِ فَلْيَمْدُدْ بِسَبَبٍ إِلَى ٱلسَّمَآءِ ثُمَّ لْيَقْطَعْ فَلْيَنظُرْ هَلْ يُذْهِبَنَّ كَيْدُهُۥ مَا يَغِيظُ ﴿١٥﴾

16. Saasaanna kuugu soo dejinnay aayaad cad Alle na wuxuu hanuuniyaa cidduu doono.

وَكَذَٰلِكَ أَنزَلْنَٰهُ ءَايَٰتٍۭ بَيِّنَٰتٍ وَأَنَّ ٱللَّهَ يَهْدِى مَن يُرِيدُ ﴿١٦﴾

17. Kuwa rumeeyey (xaqa) iyo kuwa yuhuudoobay iyo saabi'iinta (xiddigaha caabuda) iyo nasaarada iyo majuusiga iyo mushrikiinta Alle ayaa kala bixin dhexdooda maalinta qiyaame, Alle na wax kasta wuu arkaa.

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَٱلَّذِينَ هَادُواْ وَٱلصَّٰبِـِٔينَ وَٱلنَّصَٰرَىٰ وَٱلْمَجُوسَ وَٱلَّذِينَ أَشْرَكُوٓاْ إِنَّ ٱللَّهَ يَفْصِلُ بَيْنَهُمْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ شَهِيدٌ ﴿١٧﴾

18. Miyaadan arkayn inay Alle u sujuudaan waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan, iyo qorraxda iyo dayaxa iyo xidigaha iyo buuraha iyo geedaha iyo xayawaanka iyo wax badan oo dadka ah, wax badanna waxaa ku sugnaaday korkooda cadaab, ruuxuu ihaaneeyo Alle na ma laha wax sharrifi, Alle na wuxuu falaa wuxuu doono.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ ٱللَّهَ يَسْجُدُ لَهُۥ مَن فِى
ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَن فِى ٱلْأَرْضِ وَٱلشَّمْسُ
وَٱلْقَمَرُ وَٱلنُّجُومُ وَٱلْجِبَالُ وَٱلشَّجَرُ
وَٱلدَّوَآبُّ وَكَثِيرٌ مِّنَ ٱلنَّاسِ ۗ وَكَثِيرٌ
حَقَّ عَلَيْهِ ٱلْعَذَابُ ۗ وَمَن يُهِنِ ٱللَّهُ
فَمَا لَهُۥ مِن مُّكْرِمٍ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ يَفْعَلُ مَا
يَشَآءُ ﴿١٨﴾

Ciddii wanaag fasha waxaa lagu abaal marin wanaag, ciddiise u malayn Nabiga inaan Alle u gargaarayn adduun iyo aakhiraba hadduu doono cadho ha u dhinto bal inay wax u tarto, Alle na quraan cad yuu soo dejiyey, Alle ayaana hanuuniya cidduu doono, dhammaanna muslim iyo gaalo Alle ayaa kala bixin qiyaamada, wax kastana Ilaahay buu u sujuudaa, oo u khushuucaa una hoggaansamaa, sujuudduna ma aha tan dadkoo kale ee wax kasta wuxuu u sujuudaa si ku habboon, waxaana sugnaatay in shaydaanku qoomamayn markuu galo naarta, mu'miniintuna jannada, oo sheegi inuu khasaaray markuu diiday sujuudda. Waxayna ku tusin in ciddii sujuudi wayda ay raacday sheydaan kana leexatay jidka toosan. **[Al-Xajj: 14-18].**

19. Labadani waa doodayaal, waxayna ku doodeen Rabbigood, kuwa gaaloobay waxaa loo goyn maryo naar ah waxaana lagu shubi korkooda biyo kulul.

* هَٰذَانِ خَصْمَانِ ٱخْتَصَمُوا۟ فِى رَبِّهِمْ ۖ
فَٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ قُطِّعَتْ لَهُمْ ثِيَابٌ مِّن
نَّارٍ يُصَبُّ مِن فَوْقِ رُءُوسِهِمُ ٱلْحَمِيمُ ﴿١٩﴾

20. Waxana lagu gubaa (lagu dhalaaliyaa) waxa caloosha ku jira iyo jidhka (haragga).

يُصْهَرُ بِهِۦ مَا فِى بُطُونِهِمْ وَٱلْجُلُودُ ﴿٢٠﴾

21. Waxay mudan budhadh bir ah.

وَلَهُم مَّقَٰمِعُ مِنْ حَدِيدٍ ﴿٢١﴾

22. Markastooy doonaan inay ka baxaan xaggeeda walbahaar dartiis waa lagu celiyaa dhexdeeda (waxaana la dhahaa) dhadhamiya cadaabka gubidda.

كُلَّمَآ أَرَادُوٓا۟ أَن يَخْرُجُوا۟ مِنْهَا مِنْ
غَمٍّ أُعِيدُوا۟ فِيهَا وَذُوقُوا۟ عَذَابَ
ٱلْحَرِيقِ ﴿٢٢﴾

23. Alle na wuxuu galiyaa kuwa rumeeyey (xaqa) oo fala camal fiican jannooyin ay dureeri dhexdeeda wabiyaal, waxaana loogu xidhaa dhexdeeda jinjimo dahab ah iyo jawhar, dharkooduna dhexdeeda waa xariir.

إِنَّ ٱللَّهَ يُدۡخِلُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ جَنَّٰتٖ تَجۡرِي مِن تَحۡتِهَا ٱلۡأَنۡهَٰرُ يُحَلَّوۡنَ فِيهَا مِنۡ أَسَاوِرَ مِن ذَهَبٖ وَلُؤۡلُؤٗاۖ وَلِبَاسُهُمۡ فِيهَا حَرِيرٞ ٢٣

24. Waxaana lagu hanuuniyey wanaagga hadalka, waxaana lagu hanuuniyey jidka la mahdiyo.

وَهُدُوٓاْ إِلَى ٱلطَّيِّبِ مِنَ ٱلۡقَوۡلِ وَهُدُوٓاْ إِلَىٰ صِرَٰطِ ٱلۡحَمِيدِ ٢٤

25. Kuwa gaaloobay oo ka celiya jidka Alle iyo masaajidka xurmaysan ee looga yeelay dadka sinnaan mid ku nagi iyo mid meel ka yimidba, ciddii la doonta dhexdiisa leexin dulmi ah (xumaan) waxaannu dhadhansiin cadaab daran.

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ وَيَصُدُّونَ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ وَٱلۡمَسۡجِدِ ٱلۡحَرَامِ ٱلَّذِي جَعَلۡنَٰهُ لِلنَّاسِ سَوَآءً ٱلۡعَٰكِفُ فِيهِ وَٱلۡبَادِۚ وَمَن يُرِدۡ فِيهِ بِإِلۡحَادِۭ بِظُلۡمٖ نُّذِقۡهُ مِنۡ عَذَابٍ أَلِيمٖ ٢٥

Kuwa xaqa ku socda iyo kuwa gaalaada ah waa labo kooxood oo ku doodi Alle, markaasaa Alle gaalana si daran u ciqaabi, mu'miniintana janno iyo wanaag ku abaal marin, maxaa yeelay wanaag baa Alle ku toosiyey, ciddiise gaalowda oo ka celisa dadka jidka Alle iyo masaajidka xurmaysan ee Alle u simay mu'mininta ciddii wax qallooca iyo dulmi kula timaadda dhexdiisa wuxuu ku abaal marin cadaab daran.

Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: dulmigaas waa inaad ku bannaysataa xaramka wax lagaa reebay oo xumaan ah ama dil xaq darro. Ciddii saas fashana waxay mudan cadaab daran. **[Al-Xajj: 19-25].**

26. (Xusuuso) markaan u muujinnay Nabi Ibraahim meesha baytka (kacbada) annagoo ku dhihi ha la wadaajin Alle (cibaadada) waxba, u daahirina gurigayga kuwa dhawaafi iyo kuwa taagan

وَإِذۡ بَوَّأۡنَا لِإِبۡرَٰهِيمَ مَكَانَ ٱلۡبَيۡتِ أَن لَّا تُشۡرِكۡ بِي شَيۡـٔٗا وَطَهِّرۡ بَيۡتِيَ لِلطَّآئِفِينَ وَٱلۡقَآئِمِينَ وَٱلرُّكَّعِ ٱلسُّجُودِ ٢٦

iyo kuwa ku rukuucsan ee sujuudsan.

وَأَذِّن فِي ٱلنَّاسِ بِٱلْحَجِّ يَأْتُوكَ رِجَالًا وَعَلَىٰ كُلِّ ضَامِرٍ يَأْتِينَ مِن كُلِّ فَجٍّ عَمِيقٍ ﴿٢٧﴾

27. Ogaysiina dadka xajka ha kuu yimaaddeen iyagoo lugayn (qaarna) saaran yahay mid bog dheer dhammaanteed oo ka iman jaha kasta oo dheer.

لِّيَشْهَدُوا۟ مَنَـٰفِعَ لَهُمْ وَيَذْكُرُوا۟ ٱسْمَ ٱللَّهِ فِىٓ أَيَّامٍ مَّعْلُومَـٰتٍ عَلَىٰ مَا رَزَقَهُم مِّنۢ بَهِيمَةِ ٱلْأَنْعَـٰمِ ۖ فَكُلُوا۟ مِنْهَا وَأَطْعِمُوا۟ ٱلْبَآئِسَ ٱلْفَقِيرَ ﴿٢٨﴾

28. Inay joogaan (u yimaadaan) nacfigooda dartiis, oy xusaan magaca Alle maalmo la yaqaan, waxa Alle ku arzaaqay oo ah xayawaanka nicmoolayda, ka cuna xaggeeda quudiyana kan dhibaataysan ee faqiirka ah.

ثُمَّ لْيَقْضُوا۟ تَفَثَهُمْ وَلْيُوفُوا۟ نُذُورَهُمْ وَلْيَطَّوَّفُوا۟ بِٱلْبَيْتِ ٱلْعَتِيقِ ﴿٢٩﴾

29. Markaas ha dhammeeyeen basaastooda, hana oofiyeen nadorkooda, hana dawaafeen baydka horreeyey.

Waxaa Alle tusiyey Nabi Ibraahim kacbada wuuna dhisay isagoo faray inuu gaalnimada ka nadiifiyo, dadkana xajka ugu yeedho, si ay meel kasta uga yimaaddaan, una helaan nacfi adduun iyo mid aakhiraba, una xusaan Alle, hadiyo xoola ahna ugu gawracaan waxna ka cunaan kana quudiyaan masaakiinta iyo kuwa dibaataysan, basaastana iska bi'iyaan oofiyaanna nadarka, dawaafaanna baydka horreeyey. Saasaad u aragtaa in si daran loo yimaaddo Maka xaj iyo cumro, loogana helaa wanaag iyo khayr adduun iyo aakhiraba, waana masaajid sharaf leh oy kacbadu ku taal oy waajibna tahay in la weyneeyo, waxaana sugnaatay in Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) la warsaday masaajidkee u horreyey uuna yidhi (Masaajidka Xurmaysan) lana yidhi: yaa ku xigay yidhina (Baytul Maqdis), immisaa u dhaxaysay markii la yidhina uu yidhi afartan sano.

Kacbaduna waa tan ay ula jeedsadaan muslimiintu salaadda kuna tusin midnimada iyo sinnaanta iyo isu naxariisashada, waana sharafta islaamka iyo muuqiisa. **[Al-Xajj: 26-29].**

ذَٰلِكَ ۖ وَمَن يُعَظِّمْ حُرُمَـٰتِ ٱللَّهِ فَهُوَ خَيْرٌ لَّهُۥ عِندَ رَبِّهِۦ ۗ وَأُحِلَّتْ لَكُمُ ٱلْأَنْعَـٰمُ إِلَّا مَا يُتْلَىٰ عَلَيْكُمْ ۖ

30. Waa saas, ruuxii wayneeya wuxuu reebay Alle saasaa u khayr roon Allehiis agtiisa, waxaana laydiin banneeyey

فَٱجْتَنِبُوا۟ ٱلرِّجْسَ مِنَ ٱلْأَوْثَٰنِ وَٱجْتَنِبُوا۟ قَوْلَ ٱلزُّورِ ﴿٣٠﴾

nicmoolayda waxa laydinku akhriyo mooyee, ee ka dheeraada xumaanta ah sanamyada kana dheeraada hadalka beenta ah.

حُنَفَآءَ لِلَّهِ غَيْرَ مُشْرِكِينَ بِهِۦ ۚ وَمَن يُشْرِكْ بِٱللَّهِ فَكَأَنَّمَا خَرَّ مِنَ ٱلسَّمَآءِ فَتَخْطَفُهُ ٱلطَّيْرُ أَوْ تَهْوِى بِهِ ٱلرِّيحُ فِى مَكَانٍ سَحِيقٍ ﴿٣١﴾

31. Idinkoo u toosan Alle oon mushrikiin ahayn, ruuxii u shariig yeela Alle wuxuu la mid yahay mid ka soo dhacay samada oy dafi shimbirtu ama ay ku tuuri dabayshu meel dheer oo halaag ah.

ذَٰلِكَ ۖ وَمَن يُعَظِّمْ شَعَٰٓئِرَ ٱللَّهِ فَإِنَّهَا مِن تَقْوَى ٱلْقُلُوبِ ﴿٣٢﴾

32. Waa saas ruuxii wayneeya amarrada Alle (sharcigiisa) taasi waa dhawrsashada quluubta.

لَكُمْ فِيهَا مَنَٰفِعُ إِلَىٰٓ أَجَلٍ مُّسَمًّى ثُمَّ مَحِلُّهَآ إِلَى ٱلْبَيْتِ ٱلْعَتِيقِ ﴿٣٣﴾

33. Waxaa idiinku sugnaaday (hadyada) nacfi tan iyo muddo, markaas waxay ku dhammaan baydka horreeyey.

وَلِكُلِّ أُمَّةٍ جَعَلْنَا مَنسَكًا لِّيَذْكُرُوا۟ ٱسْمَ ٱللَّهِ عَلَىٰ مَا رَزَقَهُم مِّنۢ بَهِيمَةِ ٱلْأَنْعَٰمِ ۗ فَإِلَٰهُكُمْ إِلَٰهٌ وَٰحِدٌ فَلَهُۥٓ أَسْلِمُوا۟ ۗ وَبَشِّرِ ٱلْمُخْبِتِينَ ﴿٣٤﴾

34. Ummad kasta waxaan u yeellay cibaado (ciid) inay ku xusaan Alle wuxuu ku arzaaqay oo xayawaanka nicmoolayda ah, Ilaahiinna waa Ilaah kaliya ee u hoggaansama una bishaaree kuwa xasilloon (ee cabsada) ee ah.

ٱلَّذِينَ إِذَا ذُكِرَ ٱللَّهُ وَجِلَتْ قُلُوبُهُمْ وَٱلصَّٰبِرِينَ عَلَىٰ مَآ أَصَابَهُمْ وَٱلْمُقِيمِى ٱلصَّلَوٰةِ وَمِمَّا رَزَقْنَٰهُمْ يُنفِقُونَ ﴿٣٥﴾

35. Kuwa marka la xuso Alle ay cabsato quluubtoodu, kuna samra waxa ku dhaca ee ooga salaadda, waxaan ku arzaaqnayna wax ka bixiya.

Saan soo sheegnay suuraddan waxay ka warrami camalka xajka, halkanna wuxuu Alle fari in la dhawro sharcigiisa, lagana dheeraado gaalnimada iyo beenta, illeen ciddii Alle wax la caabudda waa mid ay ku dhacday khasaare

waxayna kale oy ka warrami aayaduhu hadyada la gawrici xajka iyo habkeeda iyo in Alle kaliya la caabudo loona hoggaansamo sharcigiisa, kuwaas saas falana waa kuwa qalbigoodu cabsado oo samra, oo salaadda ooga, zakadana bixiya, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: maragga beenta ah wuxuu la sinnaaday Alle wax lala caabudo, wuxuuna akhriyey aayadda. Taasina waxay ku tusin xumaanta beenta iyo inay khatar tahay intay kala mid noqotay gaalnimada. **[Al-Xajj: 30-35].**

وَٱلْبُدْنَ جَعَلْنَٰهَا لَكُم مِّن شَعَٰٓئِرِ ٱللَّهِ لَكُمْ فِيهَا خَيْرٌ ۖ فَٱذْكُرُوا۟ ٱسْمَ ٱللَّهِ عَلَيْهَا صَوَآفَّ ۖ فَإِذَا وَجَبَتْ جُنُوبُهَا فَكُلُوا۟ مِنْهَا وَأَطْعِمُوا۟ ٱلْقَانِعَ وَٱلْمُعْتَرَّ ۚ كَذَٰلِكَ سَخَّرْنَٰهَا لَكُمْ لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿٣٦﴾

36. Loogga (hadyada) waxaan idiinka yeellay sharciga calaamooyinka waaweyn ee Alle (xajka idin faray), waxaana idiinku sugan dhexdeeda khayr ee ku xusa magaca Alle korkeeda iyadoo jilib xidhan, markay u dhacdo dhinacna wax ka cuna, kana quudiya kan dhawrsoon iyo kan warsanba, saasaanna idiinku fududaynaa, inaad mahdisaan.

لَن يَنَالَ ٱللَّهَ لُحُومُهَا وَلَا دِمَآؤُهَا وَلَٰكِن يَنَالُهُ ٱلتَّقْوَىٰ مِنكُمْ ۚ كَذَٰلِكَ سَخَّرَهَا لَكُمْ لِتُكَبِّرُوا۟ ٱللَّهَ عَلَىٰ مَا هَدَىٰكُمْ ۗ وَبَشِّرِ ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿٣٧﴾

37. Ma gaadho Alle hilibkeedu iyo dhiiggeedu waxaase gaadha ka dhawrsoonidiinna, saasaana Alle idiinku fududeeyaa inaad ku waynaysaan wuxuu idinku hanuuniyey una bishaaree kuwa wanaagga fala.

إِنَّ ٱللَّهَ يُدَٰفِعُ عَنِ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُحِبُّ كُلَّ خَوَّانٍ كَفُورٍ ﴿٣٨﴾

38. Alle na wuu daafacaa kuwa rumeeyey (xaqa) Alle na ma jecla mid kastoo khayaamo badan oo gaalnimo badan.

أُذِنَ لِلَّذِينَ يُقَٰتَلُونَ بِأَنَّهُمْ ظُلِمُوا۟ ۚ وَإِنَّ ٱللَّهَ عَلَىٰ نَصْرِهِمْ لَقَدِيرٌ ﴿٣٩﴾

39. Waxaa loo idmay kuwa lala dagaallami (inay dagaallamaan) maxaa yeelay waa la dulmiyey, Alle na gargaarkooda wuu karaa.

40. Waana kuwa laga bixiyey guryahoodii xaq darro iyo inay dheheen Rabbiganno waa Ilaahay, haddayna jirin ku daaficidda Alle dadka qaarkood qaar waxaa la dumin lahaa macaabidda kiristaanka u go'ay cibaadada, iyo kaniisadaha kiristaanka, iyo kaniisadaha yahuudda , iyo masaajidda lagu xuso dhexdeeda magaca Alle wax badan, wuuna u gargaari Alle cidii u gargaarta (diintiisa) Alle na waa xoog badane adkaada.

ٱلَّذِينَ أُخْرِجُوا۟ مِن دِيَـٰرِهِم بِغَيْرِ حَقٍّ إِلَّآ أَن يَقُولُوا۟ رَبُّنَا ٱللَّهُ ۗ وَلَوْلَا دَفْعُ ٱللَّهِ ٱلنَّاسَ بَعْضَهُم بِبَعْضٍ لَّهُدِّمَتْ صَوَٰمِعُ وَبِيَعٌ وَصَلَوَٰتٌ وَمَسَـٰجِدُ يُذْكَرُ فِيهَا ٱسْمُ ٱللَّهِ كَثِيرًا ۗ وَلَيَنصُرَنَّ ٱللَّهُ مَن يَنصُرُهُۥٓ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَقَوِىٌّ عَزِيزٌ ﴿٤٠﴾

Xoolaha Alle ayaa noogu nicmeeyey, cunno, cabbid, rarasho, korid iyo waxyaalo kale, hadyana xajkaa loogu qalaa waxaana wax laga siiyaa kuwa baahan, Ilaahayna dan kama leh hilibkeeda iyo dhiiggeeda ee wuxuu ka abaalmariyaa wanaagga, Rabbi ayaana daafaca mu'miniinta dhabta ah loona idmay inay dagaallamaan, illeen waa la dulmiyey oo xaq darro looga soo bixiyey guryahoodiiye, haddaan Alle mu'miniinta ku daaficin gaaladana waxaa la dumin lahaa meelaha lagu caabudo Alle. **[Al-Xajj: 36-40].**

41. Waana kuwa haddaan makaninno dhulka ooga salaadda oo bixiya zakada oo fara wanaagga oo ka reeba xumaanta, Alle ayaana iskale cidhibta arrimaha.

ٱلَّذِينَ إِن مَّكَّنَّـٰهُمْ فِى ٱلْأَرْضِ أَقَامُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ وَءَاتَوُا۟ ٱلزَّكَوٰةَ وَأَمَرُوا۟ بِٱلْمَعْرُوفِ وَنَهَوْا۟ عَنِ ٱلْمُنكَرِ ۗ وَلِلَّهِ عَـٰقِبَةُ ٱلْأُمُورِ ﴿٤١﴾

42. Hadday ku beeniyaan waxaa beeniyey hortood qoomkii (Nabi) Nuux iyo Caad iyo Thamuud.

وَإِن يُكَذِّبُوكَ فَقَدْ كَذَّبَتْ قَبْلَهُمْ قَوْمُ نُوحٍ وَعَادٌ وَثَمُودُ ﴿٤٢﴾

43. Iyo qoomkii (Nabi) Ibraahim iyo qoomkii (Nabi) Luudh.

وَقَوْمُ إِبْرَٰهِيمَ وَقَوْمُ لُوطٍ ﴿٤٣﴾

وَأَصۡحَٰبُ مَدۡيَنَۖ وَكُذِّبَ مُوسَىٰۖ فَأَمۡلَيۡتُ لِلۡكَٰفِرِينَ ثُمَّ أَخَذۡتُهُمۡۖ فَكَيۡفَ كَانَ نَكِيرِ ٤٤

44. Iyo ehelkii Madyan, waana la beeniyey (Nabi) Muuse, waana sugay gaalada markaasaan qabtay ee see noqday ciqaabkii (aan ciqaabay; booskiisii ayuu dhacay).

فَكَأَيِّن مِّن قَرۡيَةٍ أَهۡلَكۡنَٰهَا وَهِيَ ظَالِمَةٞ فَهِيَ خَاوِيَةٌ عَلَىٰ عُرُوشِهَا وَبِئۡرٖ مُّعَطَّلَةٖ وَقَصۡرٖ مَّشِيدٍ ٤٥

45. Maxay badan tahay magaalo aan halaagnay iyadoo gardaran iyaduna u dhacday darbiyadeedii iyo ceel la halleeyey iyo daar wayn (markii la halaagay dadkii).

أَفَلَمۡ يَسِيرُواْ فِي ٱلۡأَرۡضِ فَتَكُونَ لَهُمۡ قُلُوبٞ يَعۡقِلُونَ بِهَآ أَوۡ ءَاذَانٞ يَسۡمَعُونَ بِهَاۖ فَإِنَّهَا لَا تَعۡمَى ٱلۡأَبۡصَٰرُ وَلَٰكِن تَعۡمَى ٱلۡقُلُوبُ ٱلَّتِي فِي ٱلصُّدُورِ ٤٦

46. Miyeyna ku soconin dhulka oy u ahaato quluub ay wax ku kasaan ama dhago oy wax ku maqlaan, indha beelka dhabta ahna waa indho beelka quluubta ku sugan laabta.

Kuwa Alle u yaboohay una gargaaro waa kuwa niyeysan in hadduu Alle makaniyo ay dhulka ku maamuli diinta Alle iyo sharcigiisa, oo dhawri salaadda, zakada, wanaag faridda, xumaan ka reebidda, iyo khayroo dhan. Kuwaan saas ahaynse siday ku mudan gargaar Alle, cidiise beenisa Nabiga iyo xaqa, waxay la mid noqon kuwii hore ee beeniyey lana ciqaabay, immisaana la halaagay magaalo kibirtay oy guryihii, ceelashii iyo meel kastaba cidlowday, wayna arki kartaa ciddii marta dhulka. Indha la'aanta dhabta ahna waa tan qalbiga mar haddaan xaqa, hanuunka iyo nuurka Alle lagu garanayn. **[Al-Xajj: 41-46].**

وَيَسۡتَعۡجِلُونَكَ بِٱلۡعَذَابِ وَلَن يُخۡلِفَ ٱللَّهُ وَعۡدَهُۥۚ وَإِنَّ يَوۡمًا عِندَ رَبِّكَ كَأَلۡفِ سَنَةٖ مِّمَّا تَعُدُّونَ ٤٧

47. Waxay dedejisan cadaab mana baajinaayo Alle yaboohiisa, maalin Alle agtiisana waxay la mid tahay kun sano oo waxaad tirinaysaana.

وَكَأَيِّن مِّن قَرۡيَةٍ أَمۡلَيۡتُ لَهَا وَهِيَ ظَالِمَةٞ ثُمَّ أَخَذۡتُهَا وَإِلَيَّ ٱلۡمَصِيرُ ٤٨

48. Badanaa magaalo aan u sugnay (oon u kaadinnay) iyadoo daalimad ah, markaas aan qabtay xaggayga umbaana loo ahaan.

49. Waxaad dhahdaa dadow waxaan uun anigu idiin ahay dige cad.

قُلْ يَـٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِنَّمَآ أَنَا۠ لَكُمْ نَذِيرٌ مُّبِينٌ ﴿٤٩﴾

50. Kuwa rumeeyey (xaqa) oo falay camal fiican waxay mudan dambi dhaaf iyo rizqi sharaf leh (janno).

فَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّـٰلِحَـٰتِ لَهُم مَّغْفِرَةٌ وَرِزْقٌ كَرِيمٌ ﴿٥٠﴾

51. Kuwa u socda (xumaanta) aayaadkannaga (oo isku dayi) inay na daaliyaan kuwaasu waa ehelka jaxiimo.

وَٱلَّذِينَ سَعَوْ فِىٓ ءَايَـٰتِنَا مُعَـٰجِزِينَ أُو۟لَـٰٓئِكَ أَصْحَـٰبُ ٱلْجَحِيمِ ﴿٥١﴾

Mana habboona in la soo dedejisto ciqaabta Alle iyo cadaabkiisa, illeen Alle ma baajiyo yaboohiisee, maalintuna Alle agtiisa waxay la mid tahay kun sano oo waxa la tiriyo ah. Waxaana sugnaaday in Nabigu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): waxay gali fuqarada muslimiintu jannada ka hor kuwa xoolaha leh maalin nuskeed shan boqol oo sano. Cid kastoo la halaagana Alle umbay la kulmi oo abaal marin. Nabiguna waa u digaha dadka, ciddii wanaag fashana waxay mudan dambi dhaaf iyo rizqi sharaf leh, kuwa xaqa ka hor imaanna waa ehelka naarta. Mana sinna xumaanle iyo sama fale xaqa raaca oo wanaag u horseeda. **[Al-Xajj: 47-51].**

52. Rasuul kastoon dirray ama Nabi hortaa, markuu wax akhrin waxbuu ku tuuraa shaydaanku akhriskiisa, markaasuu baabi'iyaa Alle wuxuu tuuri shaydaanku wuxuuna sugaa aayaadkiisa, Alle na waa ogaade falsan.

وَمَآ أَرْسَلْنَا مِن قَبْلِكَ مِن رَّسُولٍ وَلَا نَبِىٍّ إِلَّآ إِذَا تَمَنَّىٰٓ أَلْقَى ٱلشَّيْطَـٰنُ فِىٓ أُمْنِيَّتِهِۦ فَيَنسَخُ ٱللَّهُ مَا يُلْقِى ٱلشَّيْطَـٰنُ ثُمَّ يُحْكِمُ ٱللَّهُ ءَايَـٰتِهِۦ ۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿٥٢﴾

53. Si uu uga yeelo waxa shaydaanku tuuri fidmo kuwa quluubtoodu bugto ee ka ingagan quluubta daalimiintuna waxay ku sugan yihiin khilaaf (baadi) fog.

لِّيَجْعَلَ مَا يُلْقِى ٱلشَّيْطَـٰنُ فِتْنَةً لِّلَّذِينَ فِى قُلُوبِهِم مَّرَضٌ وَٱلْقَاسِيَةِ قُلُوبُهُمْ ۗ وَإِنَّ ٱلظَّـٰلِمِينَ لَفِى شِقَاقٍۭ بَعِيدٍ ﴿٥٣﴾

وَلِيَعْلَمَ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْعِلْمَ أَنَّهُ ٱلْحَقُّ مِن رَّبِّكَ فَيُؤْمِنُوا۟ بِهِۦ فَتُخْۢبِتَ لَهُۥ قُلُوبُهُمْ ۗ وَإِنَّ ٱللَّهَ لَهَادِ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ إِلَىٰ صِرَٰطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿٥٤﴾

54. Inay ogaadaan kuwa cilmiga la siiyey «mu'miniintu» inuu yahay xaq Alle ka yimid (quraanku) oy rumeeyaan, oy u khushuucdo dartiis quluubtoodu, Allana wuu ku hanuunin kuwa rumeeyey (xaqa) jid toosan.

وَلَا يَزَالُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ فِى مِرْيَةٍ مِّنْهُ حَتَّىٰ تَأْتِيَهُمُ ٱلسَّاعَةُ بَغْتَةً أَوْ يَأْتِيَهُمْ عَذَابُ يَوْمٍ عَقِيمٍ ﴿٥٥﴾

55. Kama tagaan kuwa gaaloobay shaki intay ugu timaaddo saacaddu kado ama u yimaaddo cadaab maalin daran.

ٱلْمُلْكُ يَوْمَئِذٍ لِّلَّهِ يَحْكُمُ بَيْنَهُمْ ۚ فَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ فِى جَنَّٰتِ ٱلنَّعِيمِ ﴿٥٦﴾

56. Xukunka maalintaas Alle ayaa iska leh, wuuna kala xukmin dhexdooda, kuwa rumeeyey (xaqa) oo falay camal fiican waxay gali janada naciimo.

وَٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَكَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا فَأُو۟لَٰٓئِكَ لَهُمْ عَذَابٌ مُّهِينٌ ﴿٥٧﴾

57. Kuwa gaaloobay oo beeniyey aayaadkannagana kuwaas waxaa u sugnaaday cadaab wax dulleeya.

Qisada kutubta qaarkeed qorto oo ku saabsan in shaydaan Nabiga wax ugu tuuray intuu sanamyada sheego ma aha wax sugan, waana ka dhawrsan yahay Nabigu arrintaas, hase yeeshee gaaladaa shaydaan moodsiiyey arrintaas, Alle na xumaanta wuu tiraa xaqana wuu sugaa, si cidduu dhuminna u muuqato tii toosnaanna u muuqato, iyo inay mu'miniintu ogaadaan xaqa, jidka ku toosan, gaalana xumaan ma dayso intay uga timaaddo saacadda ama ciqaab daran, xukunka qiyaamadana Alle ayaa iska leh, isagaana kala xukumi dhexdooda, kuwa fiicanna jannuu galin kuwa xunna naar daran, Nabiguna waa ka fog yahay inuu shaydaan u soo dhawaado. **[Al-Xajj: 52-57].**

وَٱلَّذِينَ هَاجَرُوا۟ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ ثُمَّ قُتِلُوٓا۟ أَوْ مَاتُوا۟ لَيَرْزُقَنَّهُمُ ٱللَّهُ رِزْقًا حَسَنًا ۚ وَإِنَّ ٱللَّهَ لَهُوَ خَيْرُ ٱلرَّٰزِقِينَ ﴿٥٨﴾

58. Kuwa ku hijrooday jidka Alle haddana la dilo ama dhinta wuxuu ku arzaaqi kuwaas Alle rizqi wanaagsan, Alle na waa kuu khayr roon yahay rizqigiisu.

59. Wuxuuna galin meel ay ka raalli noqon (janno) Alle na waa oge dulbadan.

لَيُدْخِلَنَّهُم مُّدْخَلًا يَرْضَوْنَهُۥ ۗ وَإِنَّ ٱللَّهَ لَعَلِيمٌ حَلِيمٌ ﴿٥٩﴾

60. Waa saas, ruuxii ciqaaba inta la ciqaabay oo kale markaas la gardaraysto wuu u gargaari Alle, Alle na waa cafiye dhaafa.

* ذَٰلِكَ ۖ وَمَنْ عَاقَبَ بِمِثْلِ مَا عُوقِبَ بِهِۦ ثُمَّ بُغِىَ عَلَيْهِ لَيَنصُرَنَّهُ ٱللَّهُ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَعَفُوٌّ غَفُورٌ ﴿٦٠﴾

61. Waxaana ugu wacan in Alle galiyo habeenka maalinta galiyana maalinta habeenka, Alle na waa maqle arka.

ذَٰلِكَ بِأَنَّ ٱللَّهَ يُولِجُ ٱلَّيْلَ فِى ٱلنَّهَارِ وَيُولِجُ ٱلنَّهَارَ فِى ٱلَّيْلِ وَأَنَّ ٱللَّهَ سَمِيعٌۢ بَصِيرٌ ﴿٦١﴾

62. Waxaana ugu wacan taas in Alle xaq (sugan) yahay, waxay caabudi oo ka soo hadhayna baadil yahay, Alle na yahay sarreeye weyn.

ذَٰلِكَ بِأَنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلْحَقُّ وَأَنَّ مَا يَدْعُونَ مِن دُونِهِۦ هُوَ ٱلْبَٰطِلُ وَأَنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلْعَلِىُّ ٱلْكَبِيرُ ﴿٦٢﴾

Ciddii dar Alle u hijroota oo jahaad lagu dilo ama iska dhimata wuxuu Alle ku arzaqaa rizqi wanaagsan oo ah inuu galiyo janno ay ka raalli noqon. Tan kale ciddii la dulmiyo lana gardaraysto xaq darro wuu u gargaari Alle hadduu gargaar muto oo toosan yahay xaqana ku joogo, wuxuu yidhi Sharaxbiil binu Simdha: waxaa dheeraaday nagaadigannagii dhulka ruum markaasuu na maray Salmaan (Al Faarisi) wuxuuna yidhi: waxaan maqlay Rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) oo leh: ruuxii dhinta isagoo muraabid ah (gaalada dhulka ka dhawri) waxaa u socon ajir la mid ah kii uu ka heli jiray camalkiisii hore, rizqina waa la siin, waxaana laga nabad galin kuwa wax fidmeeya.

Habeenka iyo maalintana Alle ayaa iska leh maamulkooda, waana Allaha xaqa ah, waxa la caabudo ee ka soo hadhayna baadil yahay, waana sarreeyaha wayn, waana in Allahaas si dhab ah loo caabudo xagga caqiidada, xukunka, akhalaaqda, macaamilada, wax walbana lagu dhaqo sharcigiisa xaqa ah, ee caadilka ah. **[Al-Xajj: 58-62].**

63. Miyeydaan ogayn in Alle ka soo dejiyo samada biyo oo ahaado dhulku cagaar, Alle na waa oge xeel dheer.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ ٱللَّهَ أَنزَلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَتُصْبِحُ ٱلْأَرْضُ مُخْضَرَّةً ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَطِيفٌ خَبِيرٌ ﴿٦٣﴾

لَّهُۥ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِى ٱلْأَرْضِ ۚ وَإِنَّ ٱللَّهَ لَهُوَ ٱلْغَنِىُّ ٱلْحَمِيدُ ﴿٦٤﴾

64. Waxaa u sugnaaday Alle waxa samaawaadka ku sugan iyo waxa dhulka ku sugan, Alle na waa hodan mahadsan.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ ٱللَّهَ سَخَّرَ لَكُم مَّا فِى ٱلْأَرْضِ وَٱلْفُلْكَ تَجْرِى فِى ٱلْبَحْرِ بِأَمْرِهِۦ ۚ وَيُمْسِكُ ٱلسَّمَآءَ أَن تَقَعَ عَلَى ٱلْأَرْضِ إِلَّا بِإِذْنِهِۦٓ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ بِٱلنَّاسِ لَرَءُوفٌ رَّحِيمٌ ﴿٦٥﴾

65. Miyeyedaan ogayn in Alle idiin sakhiray waxa ku sugan dhulka iyo markabka socda badda dhexdeeda amarka Alle, wuxuuna ka hayaa samada inay ku dhacdo dhulka idinka Alle mooyee, Alle na dadka waa u naxariis badane.

وَهُوَ ٱلَّذِىٓ أَحْيَاكُمْ ثُمَّ يُمِيتُكُمْ ثُمَّ يُحْيِيكُمْ ۗ إِنَّ ٱلْإِنسَٰنَ لَكَفُورٌ ﴿٦٦﴾

66. Alle na waa kan idin nooleeya, haddana idin dila haddana idin nooleeya, dadkuna waa diidmo badane (nicmada Alle).

لِّكُلِّ أُمَّةٍ جَعَلْنَا مَنسَكًا هُمْ نَاسِكُوهُ ۖ فَلَا يُنَٰزِعُنَّكَ فِى ٱلْأَمْرِ ۚ وَٱدْعُ إِلَىٰ رَبِّكَ ۖ إِنَّكَ لَعَلَىٰ هُدًى مُّسْتَقِيمٍ ﴿٦٧﴾

67. Ummad kasta waxaan u yeelnay hab cibaado oy ku cibaadaysan ee yeyna kugula doodin amarka (xaqa), uguna yeedh xagga Allehaa, adigu waxaad ku sugan tahay hanuun toosane.

وَإِن جَٰدَلُوكَ فَقُلِ ٱللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا تَعْمَلُونَ ﴿٦٨﴾

68. Hadday kula doodaan waxaad dhahdaa Alle ayaa og waxaad falaysaan.

ٱللَّهُ يَحْكُمُ بَيْنَكُمْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ فِيمَا كُنتُمْ فِيهِ تَخْتَلِفُونَ ﴿٦٩﴾

69. Alle na wuu kala xugmin dhexdooda maalinta qiyaame waxay isku khilaafsanaayeen.

Waxaa ku tusin qudrada Alle iyo awooddiisa roobka doogga soo bixin, dhulkana cagaara oo qurxiya, iyo awooddiisa cirka iyo dhulka iyo hodannimadiisa. Waxaa kale oo tusin ilaahnimadiisa sakhiridda waxa dhulka ku sugan, iyo doonta ku socota badda amarka Alle iyo inuu cirka ka hayo inuu ku dhaco dhulka, waana u naxariistaha dadka, waana kan wax nooleeya waxna dila, hadana nooleyn, dadse waa gaalnimo badane, ummad kastana Alle wuxuu u yeelay cibaado ay gudato ee yaan xaqa lagugala murmin, uguna yeedh xaqa waxaad ku sugan

tahay jid toosane, hadday kula murmaanna Alle ayaa og waxay fali isagaana kala xukumi dhexdooda qiyaamada waxay isku diiddan yihiin. Saas darteed waa inaad xaqa ku toosnaato oon lagaa leexin, war dad iyo dhagartiisna maqlin si uu kuugu gargaaro Alle una liibaantid. **[Al-Xajj: 63-69].**

أَلَمْ تَعْلَمْ أَنَّ ٱللَّهَ يَعْلَمُ مَا فِى ٱلسَّمَآءِ وَٱلْأَرْضِ ۗ إِنَّ ذَٰلِكَ فِى كِتَٰبٍ ۚ إِنَّ ذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ يَسِيرٌ ﴿٧٠﴾

70. Miyaadan ogayn in Alle og yahay waxa ku sugan samada iyo dhulka, arrintaasna waxay ku sugan tahay kitaab, arrintaasuna Alle waa u fududdahay.

وَيَعْبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ مَا لَمْ يُنَزِّلْ بِهِۦ سُلْطَٰنًا وَمَا لَيْسَ لَهُم بِهِۦ عِلْمٌ ۗ وَمَا لِلظَّٰلِمِينَ مِن نَّصِيرٍ ﴿٧١﴾

71. Waxay caabudi Alle ka sokow wuxuusan u soo dejinnin xujo oyna u lahayn cilmi, umana sugna daalimiinta gargaare.

وَإِذَا تُتْلَىٰ عَلَيْهِمْ ءَايَٰتُنَا بَيِّنَٰتٍ تَعْرِفُ فِى وُجُوهِ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ ٱلْمُنكَرَ ۖ يَكَادُونَ يَسْطُونَ بِٱلَّذِينَ يَتْلُونَ عَلَيْهِمْ ءَايَٰتِنَا ۗ قُلْ أَفَأُنَبِّئُكُم بِشَرٍّ مِّن ذَٰلِكُمُ ۚ ٱلنَّارُ وَعَدَهَا ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ ۖ وَبِئْسَ ٱلْمَصِيرُ ﴿٧٢﴾

72. Marka lagu akhriyo korkooda aayaadkannaga oo cad cad waxaad ka garataa wajiyada kuwa gaaloobay diiddo, waxayna u dhawyihiin inay ku boodaan (dhibaan) kuwa ku akhrin aayaadkannaga, waxaad dhahdaa maydiinka warramaa wax ka shar badan taas, waa naaruu u darbay Alle kuwa gaaloobay, iyadaana u xun meel loo ahaado.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ ضُرِبَ مَثَلٌ فَٱسْتَمِعُوا۟ لَهُۥٓ ۚ إِنَّ ٱلَّذِينَ تَدْعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ لَن يَخْلُقُوا۟ ذُبَابًا وَلَوِ ٱجْتَمَعُوا۟ لَهُۥ ۖ وَإِن يَسْلُبْهُمُ ٱلذُّبَابُ شَيْـًٔا لَّا يَسْتَنقِذُوهُ مِنْهُ ۚ ضَعُفَ ٱلطَّالِبُ وَٱلْمَطْلُوبُ ﴿٧٣﴾

73. Dadow waxaa la yeelay tusaale ee dhagaysta, kuwaad baryeysaan (caabudaysaan) Alle ka sokow ma abuuraan daqsi haba u kulmeene, hadduu ka qaato daqsi waxna kama ceshadaan, waxaa tabar yar kan wax dooni (ee daqsigu wax ka qaatay) iyo kan la dooni (ee daqsiga ah).

74. Mayna waynayn Alle mudnida weynidiisa, Alle na waa xoog badane adkaada.

مَا قَدَرُوا۟ ٱللَّهَ حَقَّ قَدْرِهِۦٓ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَقَوِىٌّ عَزِيزٌ ﴿٧٤﴾

Alle na waa og yahay waxa cirka iyo dhulka ku sugan, wax walbana kitaabay ku sugan yihiin, Alle na waa u fudud yahay xaalkaasu, mana habboona in la caabudo wax Alle ka soo hadhay oon waxba ahayn, wax Alle wax uga tarina ma jiro daalimiinta, marka xaq diidayaasha lagu akhriyo aayaadka Alle oo cad cad waxaad aragtaa wajiga gaalada oo diiddan oo u dhaw inay ku boodaan cidda akhrin aayaadka Alle, waxaase shar ku dhan yahay naarta Alle u darbay kuwa gaaloobay iyadaana u xun meel loo ahaado, waxay caabudi oo Alle ka soo hadhayna ma karaan abuur daqsi hadday kulmaan, hadduu wax ka qaatana kama dhacsan karaan, kan caabudi iyo kan la caabudiba waa tabar yar yihiin, mana waynayn gaaladu Alle mudnaantiisa, waana xoog badane adkaada, cid la mid ah ama ka dulmi badan oo ka xun ma jirto cid caabudday wax Alle ka soo hadhay. **[Al-Xajj: 70-74].**

75. Alle wuxuu ka doortaa malaa'igta rasuullo dadkana (rasuullo), Alle na waa maqle arka.

ٱللَّهُ يَصْطَفِى مِنَ ٱلْمَلَٰٓئِكَةِ رُسُلًا وَمِنَ ٱلنَّاسِ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ سَمِيعٌۢ بَصِيرٌ ﴿٧٥﴾

76. Wuxuuna og yahay waxa hortooda ah iyo waxa gadaashooda ah, xagga Alle ayaana loo celin umuuraha.

يَعْلَمُ مَا بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَمَا خَلْفَهُمْ ۚ وَإِلَى ٱللَّهِ تُرْجَعُ ٱلْأُمُورُ ﴿٧٦﴾

77. Kuwa (xaqa) rumeeyow rukuuca oo sujuuda oo caabuda Allihiin falana khayrka waxaad u dhaw dihiin inaad liibaantaane.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ٱرْكَعُوا۟ وَٱسْجُدُوا۟ وَٱعْبُدُوا۟ رَبَّكُمْ وَٱفْعَلُوا۟ ٱلْخَيْرَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿٧٧﴾

78. Kuna dadaala dar Alle dadaal dhab ah, isagaana idin doortay, mana yeelin diinta dhib, waa milladdii aabihiin Ibraahim, isagaana (Alle) idinku magacaabay muslimiin horay iyo quraankan si Rasuulku marag korkiinna ugu noqdo, idinkuna aad marag u ahaataan dadka, ee

وَجَٰهِدُوا۟ فِى ٱللَّهِ حَقَّ جِهَادِهِۦ ۚ هُوَ ٱجْتَبَىٰكُمْ وَمَا جَعَلَ عَلَيْكُمْ فِى ٱلدِّينِ مِنْ حَرَجٍ ۚ مِّلَّةَ أَبِيكُمْ إِبْرَٰهِيمَ ۚ هُوَ سَمَّىٰكُمُ ٱلْمُسْلِمِينَ مِن قَبْلُ وَفِى هَٰذَا لِيَكُونَ ٱلرَّسُولُ شَهِيدًا عَلَيْكُمْ وَتَكُونُوا۟ شُهَدَآءَ عَلَى ٱلنَّاسِ ۚ

ooga salaadda oo bixiya zakada oo ku kalsoonaada Alle oo tala saarta, isagaa gargaarihiinna ah isagaana u fiican sayid isagaana u fiican gargaare.

فَأَقِيمُواْ ٱلصَّلَوٰةَ وَءَاتُواْ ٱلزَّكَوٰةَ وَٱعۡتَصِمُواْ بِٱللَّهِ هُوَ مَوۡلَىٰكُمۡۖ فَنِعۡمَ ٱلۡمَوۡلَىٰ وَنِعۡمَ ٱلنَّصِيرُ ٧٨

Alle isagaa og meeshuu wax ka diri iyo cidduu diri iyo cidda loo diriba, siduu wax walba u og yahay. Tan kale wuxuu fari Alle in salaadda la oogo Alle na si dhab ah loo caabudo, khayrkana la falo si loo liibaano, dar Alle na loo jahaado, illeen Ilaahaybaa doortay ummaddan Muxamadiyadee, dhibna ma yeelin diintii, waxay waafaqsan tahay diintii Nabi Ibraahim, Ilaahay baana muslimiin nagu magacaabay mar hore, iyo quraankaba.

Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) marag buu noo yahay ummadduna waa maragga dadka kale, waase in salaadda la oogo, zakadana la bixiyo, lana qabsado xadhigga Alle, illeen isagaa sayidkeenna iyo gargaaraheenna ah una wanaagsan gargaaree, waana kaas islaamka toosan oo wanaag, islaannimo, xumaan ka tagid iyo samo fal ah, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: ruuxii u yeedha yeedhid jaahiliyo wuxuu dhex fadhiisan jahannamo, markaasuu nin yidhi: Rasuulka Allow, haba soomo oo tukado? Markaasuu yidhi: haba soomo oo tukado, u yeedha yeedhidda Alle oo ah inuu idinku magacaabay muslimiin, addoommada Allow. **[Al-Xajj: 75-78].**

Suurat Al-Mu'minuun

سُورَةُ ٱلْمُؤْمِنُونَ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaa dhab ahaan u liibaanay mu'miniinta.

قَدْ أَفْلَحَ ٱلْمُؤْمِنُونَ ﴿١﴾

2. Ah kuwa salaaddooda ku khushuuca.

ٱلَّذِينَ هُمْ فِى صَلَاتِهِمْ خَٰشِعُونَ ﴿٢﴾

3. Oo ah kuwa hadalka macno darro ka jeedsada.

وَٱلَّذِينَ هُمْ عَنِ ٱللَّغْوِ مُعْرِضُونَ ﴿٣﴾

4. Oo ah kuwa fala zakada «bixiya».

وَٱلَّذِينَ هُمْ لِلزَّكَوٰةِ فَٰعِلُونَ ﴿٤﴾

5. Oo ah kuwa furuujtooda ilaaliya.

وَٱلَّذِينَ هُمْ لِفُرُوجِهِمْ حَٰفِظُونَ ﴿٥﴾

6. Haweenkooda iyo waxay hanatay gacantoodu mooyee, laguma dagaalo taas.

إِلَّا عَلَىٰٓ أَزْوَٰجِهِمْ أَوْ مَا مَلَكَتْ أَيْمَٰنُهُمْ فَإِنَّهُمْ غَيْرُ مَلُومِينَ ﴿٦﴾

7. Ruuxiise doona waxaas wax ka soo hadhay kuwaasu waa xad gudbayaal.

فَمَنِ ٱبْتَغَىٰ وَرَآءَ ذَٰلِكَ فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْعَادُونَ ﴿٧﴾

8. Waa kuwa ammaanadooda iyo ballankooda dhawra.

وَٱلَّذِينَ هُمْ لِأَمَٰنَٰتِهِمْ وَعَهْدِهِمْ رَٰعُونَ ﴿٨﴾

9. Waana kuwa salaadda ilaaliya.

وَٱلَّذِينَ هُمْ عَلَىٰ صَلَوَٰتِهِمْ يُحَافِظُونَ ﴿٩﴾

10. Kuwaasu waa kuwa dhaxli.

أُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْوَٰرِثُونَ ﴿١٠﴾

11. Oo ah kuwa dhaxli firdowsa wayna ku dhex waari.

ٱلَّذِينَ يَرِثُونَ ٱلْفِرْدَوْسَ هُمْ فِيهَا خَٰلِدُونَ ﴿١١﴾

Suuraddan waxaa lagu magacaabaa suuratul mu'minuun, waxayna ku billaabatay liibaanta mu'miniinta ku khushuuca salaadda, oo macna la'aanta hadal ah ka jeedsada, oo zakada fala, oo iska dhawra waxaan Alle u xalaalayn, oo amaanada iyo ballankooda ilaaliya, salaaddana ilaaliya, kuwaasuna waa uun kuwa dhaxli jannada fardowsa kuna waari dhexdeeda. Waana taas tilmaanta dhabta ah ee ruuxa mu'minka ah ee mudan liibaan iyo jannada Alle, waana liibaan aan wax la mid ah jirin. Caa'isha Alle ha ka raalli noqdee waxaa la warsaday dabeecaddii Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) waxayna tidhi: dabeecaddiisu waxay ahayd quraanka, waxayna akhriday billowga suuraddan tan iyo aayadda sagaalaad. Mana qarsoona wanaagga salaadda, bixinta zakada, ka jeedsashada hadal macno darro, ka fogaanshaha zinada, ilaalinta ammaanada iyo ballanka iyo wanaagga ku dadaalka. **[Al-Mu'minuun: 1-11].**

وَلَقَدْ خَلَقْنَا ٱلْإِنسَٰنَ مِن سُلَٰلَةٍ مِّن طِينٍ ﴿١٢﴾

12. Waxaan ka abuurray dadka wax laga soo soocay dhoobo.

ثُمَّ جَعَلْنَٰهُ نُطْفَةً فِى قَرَارٍ مَّكِينٍ ﴿١٣﴾

13. Markaasaan ka yeellay dhibic ku jirta meel sugan.

ثُمَّ خَلَقْنَا ٱلنُّطْفَةَ عَلَقَةً فَخَلَقْنَا ٱلْعَلَقَةَ مُضْغَةً فَخَلَقْنَا ٱلْمُضْغَةَ عِظَٰمًا فَكَسَوْنَا ٱلْعِظَٰمَ لَحْمًا ثُمَّ أَنشَأْنَٰهُ خَلْقًا ءَاخَرَ ۚ فَتَبَارَكَ ٱللَّهُ أَحْسَنُ ٱلْخَٰلِقِينَ ﴿١٤﴾

14. Markaasaan ka abuurray dhibicdii calaqo kana abuurray calaqadii goosin, kana abuurray goosintii lafo oon huwinnay lafihii hilib, markaasaan ka ahaysiinnay khalqi kale, waxaa khayr badnaaday Allaha u wanaagsan inta wax samaysa ee wax jaangoysa.

ثُمَّ إِنَّكُم بَعْدَ ذَٰلِكَ لَمَيِّتُونَ ﴿١٥﴾

15. Markaas idinku arrintaas ka dib waad dhimanaysaan.

ثُمَّ إِنَّكُمْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ تُبْعَثُونَ ﴿١٦﴾

16. Markaas maalinta qiyaame laydin soo bixin.

وَلَقَدْ خَلَقْنَا فَوْقَكُمْ سَبْعَ طَرَآئِقَ وَمَا كُنَّا عَنِ ٱلْخَلْقِ غَٰفِلِينَ ﴿١٧﴾

17. Waxaanna ku abuurray korkiinna toddobo samo mana nihin mid khalqiga halmaansan.

Aayadahanna waxay caddayn dadka asalkiisa iyo sida Alle u abuuray una soo mareen abuur kala duwan, waxaana wayn oo ammaan muta xumaanna ka dheer Ilaaheenna wanaajiya abuurka, markaas ka dibna, wuu dilaa, wuxuuna soo bixiyaa maalinta qiyaame, waana kan ahaysiiyey korkooda toddobo samo oon halmaansaneyn khalqiga. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa

ha yeelee) wuxuu yidhi: Alle wuxuu ka abuuray (Nabi) Aadam ka soo qaad dhulkoo dhan, waxayna ahaadeen carruurtiisu sida dhulka, mid cas, mid cad, mid madow iyo mid u dhexeeya iyo mid fiican iyo mid xun iyo mid u dhexeeya. **[Al-Mu'minuun: 12-17].**

18. Waxaan ka soo dejinnay samada biyo qiyaasan, waxaanna dejinnay dhulka inaan la tagnana waan karraa.

وَأَنزَلْنَا مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءًۢ بِقَدَرٍ فَأَسْكَنَّٰهُ فِى ٱلْأَرْضِ ۖ وَإِنَّا عَلَىٰ ذَهَابٍۭ بِهِۦ لَقَٰدِرُونَ ﴿١٨﴾

19. Waxaanna idinku ahaysiinnay beero timir ah iyo cinabyo oo dhexdeeda khudaar badani ku sugan tahay ood wax ka cuntaan.

فَأَنشَأْنَا لَكُم بِهِۦ جَنَّٰتٍ مِّن نَّخِيلٍ وَأَعْنَٰبٍ لَّكُمْ فِيهَا فَوَٰكِهُ كَثِيرَةٌ وَمِنْهَا تَأْكُلُونَ ﴿١٩﴾

20. Iyo geed ka baxa duur siina oo soo saara subag iyo koosaar kuwa cuni.

وَشَجَرَةً تَخْرُجُ مِن طُورِ سَيْنَآءَ تَنۢبُتُ بِٱلدُّهْنِ وَصِبْغٍ لِّلْءَاكِلِينَ ﴿٢٠﴾

21. Waxaa idiinku sugnaaday xoolaha waano, waxaanna idinka waraabinnaa waxa caloosheeda ku sugan waxaana idinku sugan manfaco badan, xaggeedaadna wax ka cuntaan.

وَإِنَّ لَكُمْ فِى ٱلْأَنْعَٰمِ لَعِبْرَةً ۖ نُّسْقِيكُم مِّمَّا فِى بُطُونِهَا وَلَكُمْ فِيهَا مَنَٰفِعُ كَثِيرَةٌ وَمِنْهَا تَأْكُلُونَ ﴿٢١﴾

22. Korkeeda iyo markabka korkiisa yaana laydinku xambaaraa.

وَعَلَيْهَا وَعَلَى ٱلْفُلْكِ تُحْمَلُونَ ﴿٢٢﴾

23. Waxaan u dirray (Nabi) Nuux qoomkiisii wuxuuna yidhi qoomkayow caabuda Alle idiinma sugnaannin Ilaah xaq lagu caabudo oo ka soo hadhaye, miyeydaan dhawrsanayn.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا نُوحًا إِلَىٰ قَوْمِهِۦ فَقَالَ يَٰقَوْمِ ٱعْبُدُوا۟ ٱللَّهَ مَا لَكُم مِّنْ إِلَٰهٍ غَيْرُهُۥٓ ۚ أَفَلَا تَتَّقُونَ ﴿٢٣﴾

24. Waxayna dheheen madaxdii gaalowday oo qoomkiisa ahaa kanu ma aha waxaan dad idin la mid ah ahayn, wuxuuna doonayaa inuu idinka fadilmo, hadduu doono Alle wuxuu

فَقَالَ ٱلْمَلَؤُا۟ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مِن قَوْمِهِۦ مَا هَٰذَآ إِلَّا بَشَرٌ مِّثْلُكُمْ يُرِيدُ أَن يَتَفَضَّلَ عَلَيْكُمْ ۚ وَلَوْ شَآءَ ٱللَّهُ لَأَنزَلَ مَلَٰٓئِكَةً مَّا سَمِعْنَا بِهَٰذَا فِىٓ ءَابَآئِنَا ٱلْأَوَّلِينَ ﴿٢٤﴾

soo dejin lahaa malaa'ig,
manaan ka maqlin arrintan
aabayaalkannagii horreeyey.

25. Ma aha waxaan nin waalan
ahayn ee suga tan iyo muddo,
geerida.

إِنْ هُوَ إِلَّا رَجُلٌۢ بِهِۦ جِنَّةٌ فَتَرَبَّصُوا۟ بِهِۦ
حَتَّىٰ حِينٍ ﴿٢٥﴾

Waxaa awoodda Alle iyo qudradiisa ka mid ah roobka uu samada ka keeno markaas dhulka ku kaydiyo hadduu doono uu kaxayn karo, kuna soo bixiyo beero wax laga cuno, sida geedka subagga leh ee Siinaa oo kale, xoolahana Alle ayaa inoogu nicmeeyey, aayadaha kalena waxay ka warrami Nabi Nuux iyo qoomkiisii, iyo siday u beeniyeen, wax badan yuuna quraanku ka qisooday waxaase muhiim ah in laga leexdo jidka kuwa xun lana raaco xaqa iyo wanaagga. **[Al-Mu'minuun: 18-25].**

26. Wuxuu yidhi Rabbiyow iiga
gargaar beenintooda.

قَالَ رَبِّ ٱنصُرْنِى بِمَا كَذَّبُونِ ﴿٢٦﴾

27. Waxaanna u waxyoonnay ku
samee doon ilaalintannada iyo
waxyigannaga, markuu yimaado
amarkannagu oo burqado
tannuurku, gali doonta nooc
kastaba labo labo iyo ehelkaaga
ciddii hadal u hor maray
(halaag) mooyee oo ka mid
ah, haygulana hadlin (xaalka)
kuwa dulmiga falay iyaga waa la
maanshayne.

فَأَوْحَيْنَآ إِلَيْهِ أَنِ ٱصْنَعِ ٱلْفُلْكَ بِأَعْيُنِنَا
وَوَحْيِنَا فَإِذَا جَآءَ أَمْرُنَا وَفَارَ ٱلتَّنُّورُ
فَٱسْلُكْ فِيهَا مِن كُلٍّ زَوْجَيْنِ ٱثْنَيْنِ
وَأَهْلَكَ إِلَّا مَن سَبَقَ عَلَيْهِ ٱلْقَوْلُ
مِنْهُمْ ۖ وَلَا تُخَٰطِبْنِى فِى ٱلَّذِينَ ظَلَمُوٓا۟
إِنَّهُم مُّغْرَقُونَ ﴿٢٧﴾

28. Markaad korto adiga iyo inta
kula jirta doonta waxaad
dhahdaan mahad Alle ayaa iska
leh ah kan inaga koriyey qoomka
daalimiinta ah.

فَإِذَا ٱسْتَوَيْتَ أَنتَ وَمَن مَّعَكَ عَلَى
ٱلْفُلْكِ فَقُلِ ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ ٱلَّذِى نَجَّىٰنَا مِنَ
ٱلْقَوْمِ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٢٨﴾

29. Waxaadna dhahdaa Rabbiyow
i daji guri la barakeeyey adaa u
khayr roon dejiyee.

وَقُل رَّبِّ أَنزِلْنِى مُنزَلًا مُّبَارَكًا وَأَنتَ
خَيْرُ ٱلْمُنزِلِينَ ﴿٢٩﴾

30. Arrintaasna waxaa ku sugan aayaad waxaanna nahay kuwo wax imtixaama.

إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَآيَٰتٍ وَإِن كُنَّا لَمُبْتَلِينَ ﴿٣٠﴾

Wuxuuna ku dhammaaday xaalkii kuwaas in biyo lagu halaagay, Alle na koriyey Nabi Nuux iyo intii rumaysay, taasina waa sunnada Alle iyo imtixaamkiisa, qisaduna waxay aad ugu faah faahsan tahay suuradda Huud, waxayna ku tusin lagdanka xaqa iyo xumaanta, tan iyo waqtigii Nabi Nuux iyo inaan la waayeyn xaqdiidayaal xumaanta jecel oo wanaagga neceb, waxaase hadhi wanaagga iyo khayrka, waxaana tagi xumaanta iyo gaalnimada iyo kibirka. **[Al-Mu'minuun: 26-30].**

31. Markaasaan ahaysiinnay gadaashood qarni kale.

ثُمَّ أَنشَأْنَا مِنۢ بَعْدِهِمْ قَرْنًا ءَاخَرِينَ ﴿٣١﴾

32. Waxaanna u dirray dhexdooda Rasuul ka mid ah (oo aan la dirnay): caabuda Alle idiinma sugna Ilaah xaq lagu caabudo oo Alle ka soo hadhay, ee miyeydaan dhawrsanayn.

فَأَرْسَلْنَا فِيهِمْ رَسُولًا مِّنْهُمْ أَنِ ٱعْبُدُوا۟ ٱللَّهَ مَا لَكُم مِّنْ إِلَٰهٍ غَيْرُهُۥٓ ۚ أَفَلَا تَتَّقُونَ ﴿٣٢﴾

33. Waxay dheheen madaxdii qoomkiisa ee ah kuwii gaaloobay oo beeniyey la kulanka aakhiro oon ugu raaxaynay nolosha dhaw, kani ma aha waxaan dad idinla mid ah ahayn cunina waxaad cunaysaan, cabbina waxaad cabbaysaan.

وَقَالَ ٱلْمَلَأُ مِن قَوْمِهِ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَكَذَّبُوا۟ بِلِقَآءِ ٱلْءَاخِرَةِ وَأَتْرَفْنَٰهُمْ فِى ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا مَا هَٰذَآ إِلَّا بَشَرٌ مِّثْلُكُمْ يَأْكُلُ مِمَّا تَأْكُلُونَ مِنْهُ وَيَشْرَبُ مِمَّا تَشْرَبُونَ ﴿٣٣﴾

34. Haddaad adeecdaan dad idinla mid ah idinku waa khasaarteen.

وَلَئِنْ أَطَعْتُم بَشَرًا مِّثْلَكُمْ إِنَّكُمْ إِذًا لَّخَٰسِرُونَ ﴿٣٤﴾

35. Ma wuxuu idiin yaboohi markaad dhimataan ood noqotaan carro iyo lafo in laydin soo bixin.

أَيَعِدُكُمْ أَنَّكُمْ إِذَا مِتُّمْ وَكُنتُمْ تُرَابًا وَعِظَٰمًا أَنَّكُم مُّخْرَجُونَ ﴿٣٥﴾

36. Waa fogtahay oo fogtahay waxa laydinku gooddin.

* هَيْهَاتَ هَيْهَاتَ لِمَا تُوعَدُونَ ﴿٣٦﴾

37. Ma aha waxaan noloshannada adduunyo ahayn, waannu dhiman (qaar) oonnu noolaan (qaar) kuwa la soo bixinna ma nihin.

إِنْ هِيَ إِلَّا حَيَاتُنَا ٱلدُّنْيَا نَمُوتُ وَنَحْيَا وَمَا نَحْنُ بِمَبْعُوثِينَ ﴿٣٧﴾

38. Mana aha waxaan nin ku been abuurtay Alle ahayn, mana nihin kuwo u rumeyn.

إِنْ هُوَ إِلَّا رَجُلٌ ٱفْتَرَىٰ عَلَى ٱللَّهِ كَذِبًا وَمَا نَحْنُ لَهُۥ بِمُؤْمِنِينَ ﴿٣٨﴾

39. Wuxuuna yidhi Allow iiga gargaar beenintii ay i beeniyeen sababteed.

قَالَ رَبِّ ٱنصُرْنِي بِمَا كَذَّبُونِ ﴿٣٩﴾

40. Wuxuu yidhi Alle mudda yar ka dib yey ahaan kuwo shallaaya.

قَالَ عَمَّا قَلِيلٍ لَّيُصْبِحُنَّ نَـٰدِمِينَ ﴿٤٠﴾

41. Waxaana ku qabatay si xaq ah qaylo waxaanna ka yeellay daadxoor ee fagaansho haw sugnaado daalimiinta.

فَأَخَذَتْهُمُ ٱلصَّيْحَةُ بِٱلْحَقِّ فَجَعَلْنَـٰهُمْ غُثَآءً ۚ فَبُعْدًا لِّلْقَوْمِ ٱلظَّـٰلِمِينَ ﴿٤١﴾

Nabi Nuux gadaashiis wuxuu Alle diray rasuullo kale, waxaana beeniyey qoomkoodii iyagoo sheegi inay la mid yihiin una nool yihiin siday u nool yihiin, oy diideenna soo bixinta iyo qiyaamada, Nabigana ay xumaan ku sheegeen, wuxuuse baryay Alle, waxaana ku dhacay gaaladii halaag, taasina waa abaalka gaalada xaqa diida ee daalimiinta ah, oo ku dambayn qoomammo iyo khasaare. **[Al-Mu'minuun: 31-41].**

42. Markaasaan ahaysiinnay gadaashood quruumo kale.

ثُمَّ أَنشَأْنَا مِنۢ بَعْدِهِمْ قُرُونًا ءَاخَرِينَ ﴿٤٢﴾

43. Kamana hor marto ummadi ajasheeda (waqtigeeda) kamana dib marto.

مَا تَسْبِقُ مِنْ أُمَّةٍ أَجَلَهَا وَمَا يَسْتَـْٔخِرُونَ ﴿٤٣﴾

44. Markaasaan dirray rasuulladannadii oo israacsan markastooy ummad u yimaaddo rasuulkoodu way beeniyaan,

ثُمَّ أَرْسَلْنَا رُسُلَنَا تَتْرَا ۖ كُلَّ مَا جَآءَ أُمَّةً رَّسُولُهَا كَذَّبُوهُ ۖ فَأَتْبَعْنَا بَعْضَهُم بَعْضًا وَجَعَلْنَـٰهُمْ أَحَادِيثَ ۚ

waxaana raacsiinnay qaarkood qaar (halaag) waxaana ka yeelnay sheeko, fogaanshaana u sugnaaday qoomaan (xaqa) rumeyn.

فَبُعْدًا لِّقَوْمٍ لَّا يُؤْمِنُونَ ﴿٤٤﴾

45. Markaasaan la dirray (Nabi) Muuse iyo walaalkiis Haaruun aayadkannagii iyo xujo cad.

ثُمَّ أَرْسَلْنَا مُوسَىٰ وَأَخَاهُ هَٰرُونَ بِـَٔايَٰتِنَا وَسُلْطَٰنٍ مُّبِينٍ ﴿٤٥﴾

46. Xagga fircoon iyo jameecadiisii (yaanna u dirray) wayna is kibriyeen waxayna ahaayeen qoom is korraysiiya.

إِلَىٰ فِرْعَوْنَ وَمَلَإِيْهِۦ فَٱسْتَكْبَرُوا۟ وَكَانُوا۟ قَوْمًا عَالِينَ ﴿٤٦﴾

47. Waxayna dheheen ma waxaannu u rumayn labo ruux oo nala mid ah qoomkooduna annaga na caabudo.

فَقَالُوٓا۟ أَنُؤْمِنُ لِبَشَرَيْنِ مِثْلِنَا وَقَوْمُهُمَا لَنَا عَٰبِدُونَ ﴿٤٧﴾

48. Wayna beeniyeen waxayna noqdeen kuwo la halaagay.

فَكَذَّبُوهُمَا فَكَانُوا۟ مِنَ ٱلْمُهْلَكِينَ ﴿٤٨﴾

49. Waxaanna siinnay (Nabi) Muuse kitaabka inay hanuunaan.

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا مُوسَى ٱلْكِتَٰبَ لَعَلَّهُمْ يَهْتَدُونَ ﴿٤٩﴾

50. Waxaanna ka yeellay ina Maryama iyo hooyadiis aayad, waxaanna u dunnay meel sare oo sugnaansho iyo biyo socda leh.

وَجَعَلْنَا ٱبْنَ مَرْيَمَ وَأُمَّهُۥٓ ءَايَةً وَءَاوَيْنَٰهُمَآ إِلَىٰ رَبْوَةٍ ذَاتِ قَرَارٍ وَمَعِينٍ ﴿٥٠﴾

Markaas ka dibna waxaa yimid quruumo kale, oo midna ayna ka hor mari karin kana dib mari karin waqtigeeda, waxaana loo soo diray rasuullo si is raacsan, oo mar kasta la beenin jiray, waase la ciqaabay beeniyayaashii, markaasaa Alle diray Nabi Muuse iyo Haaruun, wixii dhexmaray isaga iyo Fircoonna wax badan yuu quraanku ka warramay waase in la waano qaato.

Sidoo kale Nabi Ciise iyo hooyadiisna waa in lagu waano qaato. **[Al-Mu'minuun: 42-50].**

51. Rasuullow ka cuna xalaasha, falana wanaag, anigu waxaad falaysaan waan ogahaye.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلرُّسُلُ كُلُوا۟ مِنَ ٱلطَّيِّبَٰتِ وَٱعْمَلُوا۟ صَٰلِحًا ۖ إِنِّى بِمَا تَعْمَلُونَ عَلِيمٌ ﴿٥١﴾

52. Tanna waa ummaddiinnii (diinta) ummad (diin) kaliya anna waxaan ahay Allihiin ee iga dhawrsada.

وَإِنَّ هَٰذِهِۦٓ أُمَّتُكُمْ أُمَّةً وَٰحِدَةً وَأَنَا۠ رَبُّكُمْ فَٱتَّقُونِ ﴿٥٢﴾

53. Waxayse u kala goosteen amarkooda dhexdooda kooxo, xisbi kastana waxa agtooda ah yey ku faraxsan yihiin.

فَتَقَطَّعُوٓا۟ أَمْرَهُم بَيْنَهُمْ زُبُرًا ۖ كُلُّ حِزْبٍۭ بِمَا لَدَيْهِمْ فَرِحُونَ ﴿٥٣﴾

54. Ee isagaga tag halmaanshahooda dhexdiisa tan iyo muddo.

فَذَرْهُمْ فِى غَمْرَتِهِمْ حَتَّىٰ حِينٍ ﴿٥٤﴾

55. Ma waxay u malayn waxaannu siin oo xoolo iyo carruur ah.

أَيَحْسَبُونَ أَنَّمَا نُمِدُّهُم بِهِۦ مِن مَّالٍ وَبَنِينَ ﴿٥٥﴾

56. Inaannu ugu soo hormarinnay khayraad, wax ma oga.

نُسَارِعُ لَهُمْ فِى ٱلْخَيْرَٰتِ ۚ بَل لَّا يَشْعُرُونَ ﴿٥٦﴾

57. Kuwa ka cabsada (cadaabka), Rabbigood ka yaabiddiis darteed.

إِنَّ ٱلَّذِينَ هُم مِّنْ خَشْيَةِ رَبِّهِم مُّشْفِقُونَ ﴿٥٧﴾

58. Kuwa uun aayaadka Rabbigood rumeeya.

وَٱلَّذِينَ هُم بِـَٔايَٰتِ رَبِّهِمْ يُؤْمِنُونَ ﴿٥٨﴾

59. Kuwa uun Rabbigood aan wax la wadaajinnin.

وَٱلَّذِينَ هُم بِرَبِّهِمْ لَا يُشْرِكُونَ ﴿٥٩﴾

60. Kuwa bixin waxay bixin iyadooy ka cabsan qluubtoodu inay xagga Alle u noqon.

وَٱلَّذِينَ يُؤْتُونَ مَآ ءَاتَوا۟ وَّقُلُوبُهُمْ وَجِلَةٌ أَنَّهُمْ إِلَىٰ رَبِّهِمْ رَٰجِعُونَ ﴿٦٠﴾

61. Kuwaasaa u deg degi khayraadka una hormari.

أُو۟لَٰٓئِكَ يُسَٰرِعُونَ فِى ٱلْخَيْرَٰتِ وَهُمْ لَهَا سَٰبِقُونَ ﴿٦١﴾

Alle wuxuu faray Nabiyada inay cunaan xalaasha wanaagna falaan, wayna fuliyeen wixii la faray, tan kale xaqu waa mid, Alle na waa mid kaliya, mana habboona in la kala tago ama lays khilaafo, mana aha xoolaha iyo carruurta la siin gaalada khayr loo soo dedejiyey, ee kuwa Alle ka yaaba, ee rumeeya

aayaadkiisa een u shariig yeelin, ee wax bixiya iyagoo ka cabsan inay Alle u noqon kuwaasaa khayrka loo soo dedejin, una hor mara. Caa'isha Alle ha ka raalli noqdee, waxay warsatay Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) in kuwa cabsan ay yihiin: kuwa xada, sinaysta, oo khamro cabba, wuxuuna yidhi: ma aha kuwaas, ee waa kuwa tukada, sooma oo zadaqaysta, haddana ka cabsan in aan laga aqbalin. (Imaam Axmed iyo Tirmidi). **[Ai-mu'minuun: 51-61].**

وَلَا نُكَلِّفُ نَفْسًا إِلَّا وُسْعَهَا ۚ وَلَدَيْنَا كِتَٰبٌ يَنطِقُ بِٱلْحَقِّ وَهُمْ لَا يُظْلَمُونَ ﴿٦٢﴾

62. Kuma mashaqayno naf waxayna karin, agtannadana waxaa ah kitaab ku hadli xaq, lamana dulmiyo iyaga.

بَلْ قُلُوبُهُمْ فِى غَمْرَةٍ مِّنْ هَٰذَا وَلَهُمْ أَعْمَٰلٌ مِّن دُونِ ذَٰلِكَ هُمْ لَهَا عَٰمِلُونَ ﴿٦٣﴾

63. Waxayse kaga sugan tahay quluubtoodu halmaansho xagga kaas, waxayna leeyihiin camallo kaas ka duwan (oo xun) oy iyagu u camal fali.

حَتَّىٰٓ إِذَآ أَخَذْنَا مُتْرَفِيهِم بِٱلْعَذَابِ إِذَا هُمْ يَجْـَٔرُونَ ﴿٦٤﴾

64. Markaanse ku qabanno kuwooda nicmaysan cadaab markaasay qaylyaan.

لَا تَجْـَٔرُوا۟ ٱلْيَوْمَ ۖ إِنَّكُم مِّنَّا لَا تُنصَرُونَ ﴿٦٥﴾

65. (Waxaana la dhihi): ha qaylyina maanta, idinku xaggannaga laydiin kama gargaaree.

قَدْ كَانَتْ ءَايَٰتِى تُتْلَىٰ عَلَيْكُمْ فَكُنتُمْ عَلَىٰٓ أَعْقَٰبِكُمْ تَنكِصُونَ ﴿٦٦﴾

66. Waxay ahayd aayaadkeygii tii lagu akhriyo korkiinna waxaadse ahaydeen kuwa cidhibtiinna dib ugu noqda (xaqa diida).

مُسْتَكْبِرِينَ بِهِۦ سَٰمِرًا تَهْجُرُونَ ﴿٦٧﴾

67. Idinkoo isku kibrin kacbada (aad maamushaan oo aad ku nabdoon tihiin), cawaysimina idinkoo hadal xun.

أَفَلَمْ يَدَّبَّرُوا۟ ٱلْقَوْلَ أَمْ جَآءَهُم مَّا لَمْ يَأْتِ ءَابَآءَهُمُ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿٦٨﴾

68. Miyeyna fiirinnin quraanka, mise waxaa u yimid waxaan u imaannin aabayaalkoodii hore.

69. Mise waxayna aqoonin Rasuulkooda oo ay diidi.

أَمْ لَمْ يَعْرِفُوا۟ رَسُولَهُمْ فَهُمْ لَهُۥ مُنكِرُونَ ﴿٦٩﴾

70. Mise waxay dhihi waa waalan yahay, wuxuuse ula yimid xaq badankoodse xaqay nici.

أَمْ يَقُولُونَ بِهِۦ جِنَّةٌۢ ۚ بَلْ جَآءَهُم بِٱلْحَقِّ وَأَكْثَرُهُمْ لِلْحَقِّ كَٰرِهُونَ ﴿٧٠﴾

Aayadahanna wuxuu Alle ku sheegay inuusan cidna ku mashaqayn waxayna karin, Alle agtiisana yahay kitaab xaq ku hadli, cid la dulminna ayna jirin, gaaladuse way halmaansan yihiin xaalkaas, waxayna leeyihiin shaqooyin kale, markase kuwooda raaxaysan kado lagu qabto markaasay Alle u qaylyaan, mase habboona inay qaylyaan, illeen horay xaqa u diideene, una gaaloobeene, isla wayni iyo kibirna ku darsadeene, miyeynase fiirinnin quraanka, mise waxaa u yimid waxaan u imaan aabayaalkoodii hore, miyeynase aqoonnin Rasuulkooda oo saasay ku diidi, mise waalli bay ku sheegi, dhabtuse waa inuu xaq ula yimid, iyana ay xaqa diidi. Jacfar iyo Abuu Sufyaanna waa kuwii u caddeeyey Najaashi iyo Hiraqle inay yaqaannaan Nabiga runtiisa, ammaanadiisa iyo nasabkiisaba.

Taasina waxay ku tusin in cidda xaqa u yeedhi tahay mid lagu yaqaan sharaf iyo ammaano. **[Al-Mu'minuun: 62-70].**

71. Hadduu raaco xaqu hawadooda waxaa fasaadi lahaa samooyinka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya, waxaanse siinnay quraanka wayse ka jeedsan quraanka.

وَلَوِ ٱتَّبَعَ ٱلْحَقُّ أَهْوَآءَهُمْ لَفَسَدَتِ ٱلسَّمَٰوَٰتُ وَٱلْأَرْضُ وَمَن فِيهِنَّ ۚ بَلْ أَتَيْنَٰهُم بِذِكْرِهِمْ فَهُمْ عَن ذِكْرِهِم مُّعْرِضُونَ ﴿٧١﴾

72. Mise waxaad warsan kharaj (ujuuro) ajirka Rabbigaabaa khayr roon, waana kan u khayr badan arzaaqe.

أَمْ تَسْـَٔلُهُمْ خَرْجًا فَخَرَاجُ رَبِّكَ خَيْرٌ ۖ وَهُوَ خَيْرُ ٱلرَّٰزِقِينَ ﴿٧٢﴾

73. Adiguna waxaad ugu yeedhi jid toosan.

وَإِنَّكَ لَتَدْعُوهُمْ إِلَىٰ صِرَٰطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿٧٣﴾

74. Kuwa aan rumeyn aakhirona jidka way ka iilan.

وَإِنَّ ٱلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِٱلْءَاخِرَةِ عَنِ ٱلصِّرَٰطِ لَنَٰكِبُونَ ﴿٧٤﴾

75. Haddaan u naxariisanno oon ka faydno waxa haya oo dhib ah waxay ku madax

* وَلَوْ رَحِمْنَٰهُمْ وَكَشَفْنَا مَا بِهِم مِّن ضُرٍّ لَّلَجُّوا۟ فِى طُغْيَٰنِهِمْ يَعْمَهُونَ ﴿٧٥﴾

taagi xumaantooda iyagoo ku indho la'.

وَلَقَدْ أَخَذْنَٰهُم بِٱلْعَذَابِ فَمَا ٱسْتَكَانُوا۟ لِرَبِّهِمْ وَمَا يَتَضَرَّعُونَ ﴿٧٦﴾

76. Waxaannu ku qabannay cadaab umana ayan hoggaansamin (dulloobin) Rabbigood umana khushuucin (iyagoo baryi).

حَتَّىٰٓ إِذَا فَتَحْنَا عَلَيْهِم بَابًا ذَا عَذَابٍ شَدِيدٍ إِذَا هُمْ فِيهِ مُبْلِسُونَ ﴿٧٧﴾

77. Markaan ku furro korkooda cadaab daran markaasay quustaan.

Quraanka iyo xaqa Alle ayaa soo dejiyey, mana raacayo hawadooda iyo siday rabaan ee wuxuu ku socon jidka toosan ee habboon, haddii kale waxaa fasaadi cirka, dhulka iyo waxa ku dhex sugan, wuxuuna Alle soo dejiyey quraan sharaf leh oy gaaladuna ka jeedsan, Nabiguna wax ujuura ah ma warsado, illeen ajriga Alle ayaa khayr roone, wuxuuse Nabigu ugu yeedhi jidka toosan, kuwaan rumayn aakhirana jidka way ka leexdaan, hadduu Alle u naxariisto oo ka faydo dhibna waxay ku sii madax taagaan xumaanta, Alle na wuu imtixaamaa mase u khushuucaan inta ay ka arkaan albaab cadaab daran oy markaas quustaan, saasuuna quraanku iyo Nabigu ugu yeedhi xaqa iyo jidka toosan, dadka qaarkiina u diidi. Siduu Nabigu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) xadiith macnihiisu yahay: waxaan idin hayaa guntiga oo dabka idin ka celin, idinkuna isku tuuraysaan waxayna u dhawdahay inaan idin sii daayo, waxaana layga celin doonaa dad, markaan dhaho: Allow waa ummadayda yaa la dhihi: ma ogid waxay sameeyeen gadaashaa, dib bay u noqdeen (gaaloobeen). Waana taas dib u noqoshada dhabta ah. **[Al-Mu'minuun: 71-77].**

وَهُوَ ٱلَّذِىٓ أَنشَأَ لَكُمُ ٱلسَّمْعَ وَٱلْأَبْصَٰرَ وَٱلْأَفْـِٔدَةَ ۚ قَلِيلًا مَّا تَشْكُرُونَ ﴿٧٨﴾

78. Alle waa kan idiin yeelay maqalka, iyo aragga iyo quluubta wax yar baadna ku shugriyeysaan (Alle).

وَهُوَ ٱلَّذِى ذَرَأَكُمْ فِى ٱلْأَرْضِ وَإِلَيْهِ تُحْشَرُونَ ﴿٧٩﴾

79. Alle waa kan idinka abuuray dhulka xaggiisaana laydiin soo celinaa.

وَهُوَ ٱلَّذِى يُحْىِۦ وَيُمِيتُ وَلَهُ ٱخْتِلَٰفُ ٱلَّيْلِ وَٱلنَّهَارِ ۚ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿٨٠﴾

80. Alle waa kan wax nooleeya, waxna dila wuxuuna leeyahay iskhilaafka (kala duwanaanta) habeenka iyo maalinta ee miyeydaan wax kasayn.

81. Waxayse dheheen wax la mid ah waxay dhaheen kuwii hore (gaaladii).

بَلْ قَالُوا۟ مِثْلَ مَا قَالَ ٱلْأَوَّلُونَ ﴿٨١﴾

82. Waxay dheheen ma markaan dhimanno oon noqonno carro iyo lafo miyaa annaga nala soo bixin.

قَالُوٓا۟ أَءِذَا مِتْنَا وَكُنَّا تُرَابًا وَعِظَٰمًا أَءِنَّا لَمَبْعُوثُونَ ﴿٨٢﴾

83. Waa naloo yaboohay annaga iyo aabayaalkeen kan (soo bixinta) horay, mana aha kani waxaan warkii hore ahayn.

لَقَدْ وُعِدْنَا نَحْنُ وَءَابَآؤُنَا هَٰذَا مِن قَبْلُ إِنْ هَٰذَآ إِلَّآ أَسَٰطِيرُ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿٨٣﴾

84. Waxaad dhahdaa yaa leh dhulka iyo waxa ku sugan haddad wax ogtihiin.

قُل لِّمَنِ ٱلْأَرْضُ وَمَن فِيهَآ إِن كُنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿٨٤﴾

85. Waxay odhan Alle, waxaad dhahdaa miyeydaan wax xusuusanayn.

سَيَقُولُونَ لِلَّهِ ۚ قُلْ أَفَلَا تَذَكَّرُونَ ﴿٨٥﴾

86. Dheh waayo Rabbiga samooyinka todobada ah iyo Rabbiga carshiga wayn.

قُلْ مَن رَّبُّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ ٱلسَّبْعِ وَرَبُّ ٱلْعَرْشِ ٱلْعَظِيمِ ﴿٨٦﴾

87. Waxay odhan Alle, dheh miyeydaan dhawrsanayn.

سَيَقُولُونَ لِلَّهِ ۚ قُلْ أَفَلَا تَتَّقُونَ ﴿٨٧﴾

88. Dheh yey gacantiisa ku jirtaa xukunka wax kasta, oo wax magan galiya, isna aan wax laga magan galinayn, haddaad wax og tihiin.

قُلْ مَنۢ بِيَدِهِۦ مَلَكُوتُ كُلِّ شَىْءٍ وَهُوَ يُجِيرُ وَلَا يُجَارُ عَلَيْهِ إِن كُنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿٨٨﴾

89. Waxay odhan Alle, dheh xaggee laydiin sixri.

سَيَقُولُونَ لِلَّهِ ۚ قُلْ فَأَنَّىٰ تُسْحَرُونَ ﴿٨٩﴾

90. Waxaanse siinnay xaq waana beenaalayaal.

بَلْ أَتَيْنَٰهُم بِٱلْحَقِّ وَإِنَّهُمْ لَكَٰذِبُونَ ﴿٩٠﴾

Alle ayaa dadka ugu nicmeeyey maqalka, aragga, caqliga iyo nicmooyinka kale si ay ugu mahdiyaan, wanaaggana ugu dhaqmaan, isagaana abuura, oo dila oo noolayn, wax walbana awooddiisa ku jiraa, dadkana soo kulmin, xukunka dhulka, cirka, carshiga, wax kasta iyo magan galintaba isagaa leh, wax dhibi ama wax u tara ama magan galinna ma jiro, sidaasayna waajib u tahay in si dhab ah loo caabudo looguna dhaqmo sharcigiisa iyo quraankiisa. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) waxaa laga weriyay inuu yidhi: xaalka Alle waa ka wayn yahay sidaas, carshigiisu wuxuu ku yahay sidaas, wuxuu ishaaray gacantiisa sida qubbad. waxaa weriyay Abuu Daawuud. Xadiithku waa taag daran yahay. **[Al-Mu'minuun: 78-90].**

مَا ٱتَّخَذَ ٱللَّهُ مِن وَلَدٍ وَمَا كَانَ مَعَهُۥ مِنْ إِلَٰهٍ ۚ إِذًا لَّذَهَبَ كُلُّ إِلَٰهٍۭ بِمَا خَلَقَ وَلَعَلَا بَعْضُهُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ ۚ سُبْحَٰنَ ٱللَّهِ عَمَّا يَصِفُونَ ﴿٩١﴾

91. Ma yeelan Alle ilmo, mana aha miciisa ilaah (kale) illeen markaas wuu la tagi lahaa ilaah walba wuxuu abuuray, wuxuuna ka kor mari lahaa (adkaan lahaa) qaarkood qaar, waxaa ka nasahan Alle waxay ku tilmaami.

عَٰلِمِ ٱلْغَيْبِ وَٱلشَّهَٰدَةِ فَتَعَٰلَىٰ عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿٩٢﴾

92. Waa ogaha waxa maqan iyo waxa jooga, wuuna ka sarreeyaa waxay la wadaajin.

قُل رَّبِّ إِمَّا تُرِيَنِّى مَا يُوعَدُونَ ﴿٩٣﴾

93. Waxaad dhahdaa Allow haddaad i tusiso waxa loo yaboohay.

رَبِّ فَلَا تَجْعَلْنِى فِى ٱلْقَوْمِ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٩٤﴾

94. Allow hayga yeelin qoomka daalimiinta ah.

وَإِنَّا عَلَىٰٓ أَن نُّرِيَكَ مَا نَعِدُهُمْ لَقَٰدِرُونَ ﴿٩٥﴾

95. Annaguna inaan ku tusinno waxaan u yaboohnay waan karraa.

ٱدْفَعْ بِٱلَّتِى هِىَ أَحْسَنُ ٱلسَّيِّئَةَ ۚ نَحْنُ أَعْلَمُ بِمَا يَصِفُونَ ﴿٩٦﴾

96. Ee ku difaac (dhaafso) tan wanaagsan midda xun, annagaa og waxay tilmaamiye (sheegi).

وَقُل رَّبِّ أَعُوذُ بِكَ مِنْ هَمَزَٰتِ ٱلشَّيَٰطِينِ ﴿٩٧﴾

97. Waxaadna dhahdaa Allow waxaan kaa magangalay waswaaska shayaadiinta.

وَأَعُوذُ بِكَ رَبِّ أَن يَحْضُرُونِ ﴿٩٨﴾

98. Waxaana kaa magan gali Allow inay ii yimaadaan shayaadiintu.

حَتَّىٰٓ إِذَا جَآءَ أَحَدَهُمُ ٱلْمَوْتُ قَالَ رَبِّ ٱرْجِعُونِ ﴿٩٩﴾

99. Markuu u yimaaddo midkood (gaalada) mawdku wuxuu dhihi Rabbiyow i celiya.

لَعَلِّيٓ أَعْمَلُ صَٰلِحًا فِيمَا تَرَكْتُ ۚ كَلَّآ ۚ إِنَّهَا كَلِمَةٌ هُوَ قَآئِلُهَا ۖ وَمِن وَرَآئِهِم بَرْزَخٌ إِلَىٰ يَوْمِ يُبْعَثُونَ ﴿١٠٠﴾

100. Waxaan u dhawahay inaan falo wanaage waxaan ka tagay, saas ma aha ee waa hadal uu iska yidhi, gadaashoodana waxaa ah barzakh, tan iyo maalinta la soo bixin.

Alle ilmo ma leh umana baahna, ilaah kalena lama jiro oo mid walba wuxuu qaadan lahaa wuxuu abuuray, midbaana midka kale ka sarreyn lahaa, waana ka nazahan yahay Alle waxaas, wax walbana waa og yahay, Alle na waa karaa ciqaabtooda, waana in Alle la warsado inuusan daalimiinta kala mid dhigin siduu Nabiga faray, xumaantana waa in wanaag lagu badalaa, shaydaankana Alle laga magan galo, si aan marka la dhiman loo calaa calin, celinna loo warsanin si camal fiican loo falo. **[Al-Mu'minuun: 91-100].**

فَإِذَا نُفِخَ فِى ٱلصُّورِ فَلَآ أَنسَابَ بَيْنَهُمْ يَوْمَئِذٍ وَلَا يَتَسَآءَلُونَ ﴿١٠١﴾

101. Marka la afuufo suurka ma jiro nasab dhexdooda maalintaas, waxna isma warsadaan.

فَمَن ثَقُلَتْ مَوَٰزِينُهُۥ فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْمُفْلِحُونَ ﴿١٠٢﴾

102. Ciddayse cuslaato miisaankiisu (wanaagga) kuwaasi waa kuwa uun liibaanay.

وَمَنْ خَفَّتْ مَوَٰزِينُهُۥ فَأُو۟لَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ خَسِرُوٓا۟ أَنفُسَهُمْ فِى جَهَنَّمَ خَٰلِدُونَ ﴿١٠٣﴾

103. Ciddayse fududaato miisaankiisu kuwaasi waa kuwa khasaariyey naftooda jahannamayna ku waari.

تَلْفَحُ وُجُوهَهُمُ ٱلنَّارُ وَهُمْ فِيهَا كَٰلِحُونَ ﴿١٠٤﴾

104. Waxaana gubi wajigooda naarta iyagoo waji diiran.

أَلَمْ تَكُنْ ءَايَٰتِى تُتْلَىٰ عَلَيْكُمْ فَكُنتُم بِهَا تُكَذِّبُونَ ﴿١٠٥﴾

105. (Waxaa lagu dhihi) miyeyna ahayn aayaadkannagu kuwa lagu akhriyo korkiinna ood beenin jirteen.

قَالُواْ رَبَّنَا غَلَبَتۡ عَلَيۡنَا شِقۡوَتُنَا وَكُنَّا قَوۡمٗا ضَآلِّينَ ١٠٦

106. Waxay dhahaan Rabbiyow waxaa naga adkaatay xumaantannadii, waxaan ahayn qaar dhunsan.

رَبَّنَآ أَخۡرِجۡنَا مِنۡهَا فَإِنۡ عُدۡنَا فَإِنَّا ظَٰلِمُونَ ١٠٧

107. Allow naga bixi xaggeeda haddaan u noqonnana annagaa daalimiin ah.

قَالَ ٱخۡسَـُٔواْ فِيهَا وَلَا تُكَلِّمُونِ ١٠٨

108. Wuxuu dhahaa Alle ku fogaada dhexdeeda idinkoo (dullaysan) hana ila hadlina.

إِنَّهُۥ كَانَ فَرِيقٞ مِّنۡ عِبَادِي يَقُولُونَ رَبَّنَآ ءَامَنَّا فَٱغۡفِرۡ لَنَا وَٱرۡحَمۡنَا وَأَنتَ خَيۡرُ ٱلرَّٰحِمِينَ ١٠٩

109. Waxaa jirtay in koox ka mid ah addoommadayda ay dhahaan Allow waan rumaynay xaqa ee noo dhaaf noona naxariiso adaa naxariiste u khayr roone.

فَٱتَّخَذۡتُمُوهُمۡ سِخۡرِيًّا حَتَّىٰٓ أَنسَوۡكُمۡ ذِكۡرِي وَكُنتُم مِّنۡهُمۡ تَضۡحَكُونَ ١١٠

110. Waxaadse ka yeelateen jees jees intay idinka halmaansiiyaan xuskayga ood kuna qoslayseen.

إِنِّي جَزَيۡتُهُمُ ٱلۡيَوۡمَ بِمَا صَبَرُوٓاْ أَنَّهُمۡ هُمُ ٱلۡفَآئِزُونَ ١١١

111. Waan ka abaal marinnay maanta samirkoodii dartiis, iyaga unbaana liibaanay.

Qiyaamada, miisaanka, jannada, naarta iyo abaal marintaba wax badan yuu quraanku soo cel celiyey, waxaase loo baahan yahay waano qaadasho. Waxbana uma taro gaalo calaacal maalintaa mar hadday beenin jireen quraanka, kuna jees jeesi jireen mu'miniinta, kuna qosli jireen, kuwaasoo wanaag lagu abaal marin maalintaas liibaanina. Waxayna caddayn aayaddu inaan nasab iyo qaraabo wax tarayn qiyaamada ee wanaag iyo xaq rumayn uun wax tari iyo toosni dhab ah. **[Al-Mu'minuun: 101-111].**

قَٰلَ كَمۡ لَبِثۡتُمۡ فِي ٱلۡأَرۡضِ عَدَدَ سِنِينَ ١١٢

112. Wuxuuna dhihi Alle immisa sanaad ku nagaateen dhulka.

قَالُواْ لَبِثۡنَا يَوۡمًا أَوۡ بَعۡضَ يَوۡمٖ فَسۡـَٔلِ ٱلۡعَآدِّينَ ١١٣

113. Waxayna odhan waxaan ku nagaannay maalin ama maalin qaarkeed, warsada kuwa wax tiriya «malaa'igta».

قَٰلَ إِن لَّبِثْتُمْ إِلَّا قَلِيلًا لَّوْ أَنَّكُمْ كُنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿١١٤﴾

114. Wuxuu yidhi maydaan nagaannin wax yar mooyee haddaad wax ogtihiin.

أَفَحَسِبْتُمْ أَنَّمَا خَلَقْنَٰكُمْ عَبَثًا وَأَنَّكُمْ إِلَيْنَا لَا تُرْجَعُونَ ﴿١١٥﴾

115. Ma waxaad u malayseen inaan idiin abuurnay ciyaar oon idinka xaggannaga loo soo celinayn.

فَتَعَٰلَى ٱللَّهُ ٱلْمَلِكُ ٱلْحَقُّ ۖ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ رَبُّ ٱلْعَرْشِ ٱلْكَرِيمِ ﴿١١٦﴾

116. Waxaa sarreeya Allaha xaakimka xaqa ah, macbuud xaqa oo aan isaga ahaynna ma jiro waana Rabbiga carshiga sharafta leh.

وَمَن يَدْعُ مَعَ ٱللَّهِ إِلَٰهًا ءَاخَرَ لَا بُرْهَٰنَ لَهُۥ بِهِۦ فَإِنَّمَا حِسَابُهُۥ عِندَ رَبِّهِۦٓ ۚ إِنَّهُۥ لَا يُفْلِحُ ٱلْكَٰفِرُونَ ﴿١١٧﴾

117. Ciddii caabudda Alle la jirkiisa ilaah kale oon xujo lahayn xisaabtiisu waa uun Alle agtiisa, mana liibaanto gaalo.

وَقُل رَّبِّ ٱغْفِرْ وَٱرْحَمْ وَأَنتَ خَيْرُ ٱلرَّٰحِمِينَ ﴿١١٨﴾

118. Waxad dhahdaa Allow u dhaaf muslinka, oo u naxariiso adaa naxariiste u khayr roone.

Gaalada xisaabtu way ka lumi qiyaamada, mana gartaan intay adduunka ku noolaayeen, waxayse sheegi inay maalin ama maalin badhkeed ku noolaayeen iyagooy la yaraatay dhibka dartiis, wax yar bayse ku noolaayeen hadday garan, dadkana ciyaar looma abuurin, waxaana sarreeya Allaha xaakimka xaqa ah, ee carshiga sharafta leh iska leh, ciddii caabudda oo xumaan iyo gaalnimo ku raacda wax kale Alle la jirkiisa Alle ayaa xisaabin, gaalana ma liibaanaan, dambi dhaaf iyo naxariisna Alle ayaa leh oo hanta. **[Al-Mu'minuun: 112-118].**

Suurat An-Nuur

سُورَةُ النُّورِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. (Tani) waa suurad aan soo dejinnay oo aan waajibinnay (axkaamta ku jirta, caddaynayna) kuna soo dejinnay dhexdeeda aayaad cad cad inaad wax xusuusataan (waano qaadataan).

سُورَةٌ أَنزَلْنَٰهَا وَفَرَضْنَٰهَا وَأَنزَلْنَا فِيهَآ ءَايَٰتٍۭ بَيِّنَٰتٍ لَّعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ ﴿١﴾

2. Zaaniyadda (haween) iyo zaaniga (ragga) garaaca mid kastoo ka mid ah boqol garaac yeyna idiin qabannin xaggooda naxariis diinta Alle dhexdeeda (oo aad xadkii ka oofin weydaan) haddaad tihiin kuwa rumeeyey Alle iyo maalinta dambe (qiyaamada) hana joogo garaacooda koox ka mid ah mu'miniinta.

ٱلزَّانِيَةُ وَٱلزَّانِى فَٱجْلِدُوا۟ كُلَّ وَٰحِدٍ مِّنْهُمَا مِاْئَةَ جَلْدَةٍ ۖ وَلَا تَأْخُذْكُم بِهِمَا رَأْفَةٌ فِى دِينِ ٱللَّهِ إِن كُنتُمْ تُؤْمِنُونَ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ ۖ وَلْيَشْهَدْ عَذَابَهُمَا طَآئِفَةٌ مِّنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٢﴾

3. Zaani ma guursado waxaan zaaniyad ahayn ama gaal, zaaniyadna ma guursato waxaan zaani ahayn ama gaal, waana laga reebay arrintaas mu'miniinta.

ٱلزَّانِى لَا يَنكِحُ إِلَّا زَانِيَةً أَوْ مُشْرِكَةً وَٱلزَّانِيَةُ لَا يَنكِحُهَآ إِلَّا زَانٍ أَوْ مُشْرِكٌ ۚ وَحُرِّمَ ذَٰلِكَ عَلَى ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٣﴾

4. Kuwa (zino) ku gana (sheega) haweenka dhawrsoon oon

وَٱلَّذِينَ يَرْمُونَ ٱلْمُحْصَنَٰتِ ثُمَّ لَمْ يَأْتُوا۟

afar marag ah keenin garaaca siddeetan garaacood, hana ka aqbalina marag waligood, kuwaasina waa uun faasiqiin.

بِأَرْبَعَةِ شُهَدَآءَ فَٱجْلِدُوهُمْ ثَمَٰنِينَ جَلْدَةً وَلَا تَقْبَلُوا۟ لَهُمْ شَهَٰدَةً أَبَدًا ۚ وَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْفَٰسِقُونَ ﴿٤﴾

5. Marka laga reebo kuwa toobad keena intaas ka dib oo wanaajiya, Alle na waa (dambi) dhaafe naxariista.

إِلَّا ٱلَّذِينَ تَابُوا۟ مِنۢ بَعْدِ ذَٰلِكَ وَأَصْلَحُوا۟ فَإِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٥﴾

Suuraddan waa suurad wayn, wax badanna ka warranta aadaabta islaamka, oyna habboon tahay in la fahmo, waxayna ku billaabatay in Alle soo dejiyey kuna caddeeyay aayaad, waxaa ku xiga ciddii zino la timaadda rag iyo haweenba oon horay wax u guursan in lala dhaco boqol ulood, oon loona nixin, maragna loo yeelo, iyo in dadka xun xun iyagu isku habboon yihiin oo zaani iyo gaal uu guursan mid la mid ah, lagana reebay mu'miniinta, gaalada kitaabka leh waa laga hadlay wayna bannaan yihiin guurka haweenkoodu, tan kale ciddii qadafta ruux dhawrsoon kuna sheegta zino, afar marag la'aan, waa in lala dhaco siddeetan ulood, lagana aqbalin marag waligiis, ciddii toobad keenta oo wanaagsanaata mooyee, waxayna ku tusin xumida zinada, dhawridda sharafta muslimka iyo wanaagga diinta islaamka. **[An-Nuur: 1-5].**

6. Kuwa qadfa (zino ku sheega) haweenkooda oon marag aan naftooda ahayn lahayn midkood maraggiisu waa inuu ku marag kaco dhaarta afar dhaarood Alle inuu run sheegi.

وَٱلَّذِينَ يَرْمُونَ أَزْوَٰجَهُمْ وَلَمْ يَكُن لَّهُمْ شُهَدَآءُ إِلَّآ أَنفُسُهُمْ فَشَهَٰدَةُ أَحَدِهِمْ أَرْبَعُ شَهَٰدَٰتٍۭ بِٱللَّهِ ۙ إِنَّهُۥ لَمِنَ ٱلصَّٰدِقِينَ ﴿٦﴾

7. Tan shanaad waa inuu ku dhaarto in lacanadda Alle ku dhacdo hadduu beenaale yahay.

وَٱلْخَٰمِسَةُ أَنَّ لَعْنَتَ ٱللَّهِ عَلَيْهِ إِن كَانَ مِنَ ٱلْكَٰذِبِينَ ﴿٧﴾

8. Waxaa ka rida iyadana ciqaabta inay ku dhaarato afar dhaarood inuu beenaale yahay.

وَيَدْرَؤُا۟ عَنْهَا ٱلْعَذَابَ أَن تَشْهَدَ أَرْبَعَ شَهَٰدَٰتٍۭ بِٱللَّهِ ۙ إِنَّهُۥ لَمِنَ ٱلْكَٰذِبِينَ ﴿٨﴾

9. Tan shanaadna waxay ku dhaaran in cadhada Alle ku dhacdo hadduu run sheegi.

وَٱلْخَٰمِسَةَ أَنَّ غَضَبَ ٱللَّهِ عَلَيْهَآ إِن كَانَ مِنَ ٱلصَّٰدِقِينَ ﴿٩﴾

وَلَوْلَا فَضْلُ ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَتُهُۥ
وَأَنَّ ٱللَّهَ تَوَّابٌ حَكِيمٌ ﴿١٠﴾

10. Hadduuna jirin fadliga Alle iyo naxariistiisa korkiinna oosan ahayn toobad aqbal badane falsan «waxaa beenaalaha ku dhici lahaa cadaab daran».

Sidoo kale ninkii haweenaydiisa zino ku sheega waxaa garaacidda ka reebi inuu shan goor Alle ku dhaarto inuu run sheegi, iyana waxay dhaaran shan jeer inuu been sheegi, ka dibna way kala furmi, waxaana loo yaqaanaa licaan. Diinta islaamkuna waa diin sharaf iyo naxariis, doonina mayso inay cidaan wax ku caddayn ceebayso, hase yeeshee uma dul qaadato waxa sharafta dhaawaca, sida ku sheegga zinada iyo wax la mid ah, mase fududa in dadka lagu sheego waxaan jirin oon caddayn, waxaa xadiith ku sugnaatay: seddex Alle ayaa ka xarrimay jannada, midka khayaamada sameeya, kan caasiya waalidka, iyo kan ehelkiisa ku suga xumaanta. Tan kale ma bannaana in been lagu dhaarto, waxayna ka mid tahay waxyaalaha dadka naarta galiya, saas darteed zino haw dhawaan, cidna zino ha ku sheegin adoon hubin, dhabtana indhaha ka qabsan, xuduudda diinta iyo islaamka ilaali, wanaagga ku dadaal, xumaanna ka dadaal. **[An-Nuur: 6-10].**

إِنَّ ٱلَّذِينَ جَآءُو بِٱلْإِفْكِ عُصْبَةٌ مِّنكُمْ ۚ
لَا تَحْسَبُوهُ شَرًّا لَّكُم ۖ بَلْ هُوَ خَيْرٌ
لَّكُمْ ۚ لِكُلِّ ٱمْرِئٍ مِّنْهُم مَّا ٱكْتَسَبَ
مِنَ ٱلْإِثْمِ ۚ وَٱلَّذِى تَوَلَّىٰ كِبْرَهُۥ مِنْهُمْ لَهُۥ
عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿١١﴾

11. Kuwa la yimid been abuurka (qadafka Caasho) waa koox idinka mid ah, how malaynina inay shar idiin tahay, waxayse idiin tahay khayr, qof kasta oo ka mid ahna waxaa u sugnaaday wuxuu kasban oo dambi ah midka qaatay waynanka arrintana oo ka mid ah wuxuu mudan cadaab weyn (Ibnu Salool).

لَّوْلَآ إِذْ سَمِعْتُمُوهُ ظَنَّ ٱلْمُؤْمِنُونَ
وَٱلْمُؤْمِنَٰتُ بِأَنفُسِهِمْ خَيْرًا وَقَالُوا۟ هَٰذَآ
إِفْكٌ مُّبِينٌ ﴿١٢﴾

12. Maxaydaan markaad maqasheen xaalka (qadafka) ayna ugu malayn mu'miniintu ragga iyo haween naftooda khayr, oyna u dhihin kaasi waa been abuur cad.

لَّوْلَا جَآءُو عَلَيْهِ بِأَرْبَعَةِ شُهَدَآءَ ۚ فَإِذْ
لَمْ يَأْتُوا۟ بِٱلشُّهَدَآءِ فَأُو۟لَٰٓئِكَ عِندَ ٱللَّهِ
هُمُ ٱلْكَٰذِبُونَ ﴿١٣﴾

13. Mayse u keenaan korkiisa afar marag, haddayna keenin marag kuwaasu Alle agtiisa waxay ku yihiin beenaalayaal.

14. Hadduuse jirin fadliga Alle ee korkiinna iyo naxariistiisa adduun iyo aakhiraba waxaa idin taaban lahaa waxaad dhexgasheen dartiis cadaab weyn.

وَلَوْلَا فَضْلُ ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَتُهُۥ فِى ٱلدُّنْيَا وَٱلْءَاخِرَةِ لَمَسَّكُمْ فِى مَآ أَفَضْتُمْ فِيهِ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿١٤﴾

15. Markaad kula kulmaysaan qadafka carrabkiinna (oo aad kala werinaysaan), oo ku dhahaysaan afkiinna waxaydaan ogayn, una malaynaysaan wax fudud isagoo Alle agtiisa ku wayn.

إِذْ تَلَقَّوْنَهُۥ بِأَلْسِنَتِكُمْ وَتَقُولُونَ بِأَفْوَٰهِكُم مَّا لَيْسَ لَكُم بِهِۦ عِلْمٌ وَتَحْسَبُونَهُۥ هَيِّنًا وَهُوَ عِندَ ٱللَّهِ عَظِيمٌ ﴿١٥﴾

Aayadahan waxay soo degeen markay munaafiqiintu isku dayeen inay dhaawacaan sharafta sayido Caa'isha bintu Abii Bakar, ahaydna haweeneeydii Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) waxaana arrintaas hoggaaminayay munaafiqii waynaa Cabdullaahi binu Ubayi binu Salool, hase yeeshee wuu ku khasaaray adduun iyo aakhiraba, Alle ayaana ku soo dejiyey quraan ka bari yeeli Caa'isha waxaa soo kale, mu'miniintana fari inay ka fogaadaan maqalka beentaas oo kale, wanaaggana ku dadaalaan. **[An-Nuur: 11-15].**

16. Markaad maqasheen maad dhahdaan nooma habboona inaan ku haddallo kan, Alle ayaa nasahan ee kan (qadafka) waa been abuur wayn.

وَلَوْلَآ إِذْ سَمِعْتُمُوهُ قُلْتُم مَّا يَكُونُ لَنَآ أَن نَّتَكَلَّمَ بِهَٰذَا سُبْحَٰنَكَ هَٰذَا بُهْتَٰنٌ عَظِيمٌ ﴿١٦﴾

17. Wuu idinka waanin Alle inaad u noqotaan isagoo kale waligeed haddaad tihiin mu'miniin.

يَعِظُكُمُ ٱللَّهُ أَن تَعُودُوا۟ لِمِثْلِهِۦٓ أَبَدًا إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ﴿١٧﴾

18. Wuxuuna idiin caddayn Alle aayaadkiisa, Alle na waa oge falsan.

وَيُبَيِّنُ ٱللَّهُ لَكُمُ ٱلْءَايَٰتِ ۚ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿١٨﴾

19. Kuwa jecel inay ku faafto xumaantu kuwa rumeeyey (xaqa) waxaa u sugnaaday cadaab daran

إِنَّ ٱلَّذِينَ يُحِبُّونَ أَن تَشِيعَ ٱلْفَٰحِشَةُ فِى ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ

adduun iyo aakhiraba, Alle na waa og yahay idinkuna ma ogidin.

فِى ٱلدُّنْيَا وَٱلْـَٔاخِرَةِ ۚ وَٱللَّهُ يَعْلَمُ وَأَنتُمْ لَا تَعْلَمُونَ ﴿١٩﴾

20. Hadduuna jirin fadliga Alle ee korkiinna iyo naxariistiisa iyo in Alle yahay naxariis badane ilaaliya, (waxaa ahaan lahaa wax kale).

وَلَوْلَا فَضْلُ ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَتُهُۥ وَأَنَّ ٱللَّهَ رَءُوفٌ رَّحِيمٌ ﴿٢٠﴾

21. Kuwa (xaqa) rumeeyow ha raacina tallaabooyinka (camalka) shaydaanka ciddii raacda tallaabooyinka shaydaanka isagu wuxuu faraa xumaanta iyo waxa la naco, hadduusan jirin fadliga Alle ee korkiinna iyo naxariistiisa ma daahireen ruux idinka mid ah waligeed, laakiin Alle ayaa daahiriya cidduu doono, Alle na waa maqle og.

* يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تَتَّبِعُوا۟ خُطُوَٰتِ ٱلشَّيْطَـٰنِ ۚ وَمَن يَتَّبِعْ خُطُوَٰتِ ٱلشَّيْطَـٰنِ فَإِنَّهُۥ يَأْمُرُ بِٱلْفَحْشَآءِ وَٱلْمُنكَرِ ۚ وَلَوْلَا فَضْلُ ٱللَّهِ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَتُهُۥ مَا زَكَىٰ مِنكُم مِّنْ أَحَدٍ أَبَدًا وَلَـٰكِنَّ ٱللَّهَ يُزَكِّى مَن يَشَآءُ ۗ وَٱللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٢١﴾

Kuma habboona mu'miniintu inay waxaa soo kale ku hadlaan, ee waa inay dhahaan Alle ayaa nasahane waa been abuurasho wayn, waana inay qaataan waanada Alle. Tan kale kuwa jecel inay xumaantu ku faafto mu'miniinta waa kuwo ciqaab mudan adduun iyo aakhiraba, waana in laga fogaado lagana digtoonaado shaydaan iyo jidkiisa, illeen xumaan umbuu fariye. Caalamkuna wuxuu ku dhisan yahay fadliga Alle iyo naxariistiisa cid wanaagsanaanna ma jiro naxariista Alle la'aanteed. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: ruuxu wuxuu ku hadlaa kalimo cadho Alle ah oosan ogayn intay gaadhi uguna hooban naarta darteed wax ka fog cirka iyo dhulka dhexdooda. (Waa saxiix). **[An-Nuur: 16-21].**

22. Yeyna ku dhaarannin kuwa fadliga (dheeraadka) leh iyo hodannimada inayan wax siinayn qaraabada, masaakiinta iyo kuwa ku hijrooda jidka Alle, hana iska cafiyaan hana saamaxeen, miyeydaan jeclayn

وَلَا يَأْتَلِ أُو۟لُوا۟ ٱلْفَضْلِ مِنكُمْ وَٱلسَّعَةِ أَن يُؤْتُوٓا۟ أُو۟لِى ٱلْقُرْبَىٰ وَٱلْمَسَـٰكِينَ وَٱلْمُهَـٰجِرِينَ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ ۖ وَلْيَعْفُوا۟ وَلْيَصْفَحُوٓا۟ ۗ أَلَا تُحِبُّونَ أَن يَغْفِرَ ٱللَّهُ لَكُمْ ۗ وَٱللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٢٢﴾

inuu idiin dhaafo Alle, Ilaahayna waa dhaafe naxariista.

إِنَّ ٱلَّذِينَ يَرْمُونَ ٱلْمُحْصَنَٰتِ

23. Kuwa gana «qadfa» haweenka dhawrsoon ee halmaansan (xumaanta) ee mu'minaadka ah waa la lacnaday adduun iyo aakhiraba, waxayna mudan cadaab weyn.

ٱلْغَٰفِلَٰتِ ٱلْمُؤْمِنَٰتِ لُعِنُوا۟ فِى ٱلدُّنْيَا وَٱلْـَٔاخِرَةِ وَلَهُمْ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿٢٣﴾

24. Maalinta ay ku marag kici carrabbadoodu, gacmahoodu, iyo lugahoodu waxay camal faleen.

يَوْمَ تَشْهَدُ عَلَيْهِمْ أَلْسِنَتُهُمْ وَأَيْدِيهِمْ وَأَرْجُلُهُم بِمَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿٢٤﴾

25. Maalintaas wuxuu u oofin Alle abaal marintooda sugan, waxayna ogaan in Alle yahay xaqa cad (sugan).

يَوْمَئِذٍ يُوَفِّيهِمُ ٱللَّهُ دِينَهُمُ ٱلْحَقَّ وَيَعْلَمُونَ أَنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلْحَقُّ ٱلْمُبِينُ ﴿٢٥﴾

26. Haweenka iyo hadalka xunba wuxuu u sugnaaday nimanka xun, kuwa xunna waxay u sugnaadeen kuwa xun, kuwa wanaagsanna waxay u sugnaadeen kuwa wanaagsan, kuwaasna (Caa'isha iyo ehelkeedu) waa ka bari (dheer yihiin) waxay sheegi, waxayna mudan dambi dhaaf iyo rizqi sharaf leh (janno).

ٱلْخَبِيثَٰتُ لِلْخَبِيثِينَ وَٱلْخَبِيثُونَ لِلْخَبِيثَٰتِ ۖ وَٱلطَّيِّبَٰتُ لِلطَّيِّبِينَ وَٱلطَّيِّبُونَ لِلطَّيِّبَٰتِ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ مُبَرَّءُونَ مِمَّا يَقُولُونَ ۖ لَهُم مَّغْفِرَةٌ وَرِزْقٌ كَرِيمٌ ﴿٢٦﴾

Waxaa jiray nin sayid Abuu Bakar qaraabo u ahaa lana noolaa oo wax yar ku hadlay arrintii Caa'isha, markaas Abuu Bakar eryay kana joojiyey kaalmadii, markaas Alle ku yar canaantay Abuu bakar xaalkaas, markaas uu soo celiyey. Aayadaha kalana waxay ka warrami in haweenka sharafta leh ee dhawrsoon ee xaqa raacay kuwa ceebeeya ay la kulmi lacnad iyo cadaab wayn aakhiro iyo adduunba oy kuna marag furi xubnahoodu lana abaal marin ayna ogaan in Alle xaq sugan yahay, illeen xumaan waxaa muta kuwa xun, samaanna waxaa muta kuwa fiican. Caa'ishana waa ka bari kana fog waxay ku sheegeen, waxayna mudan kuwaas la dhibay dambi dhaaf iyo janno, saasuuna Alle ugu bari yeelay Caa'isha aayadahan, ciqaabna ugu xukumay munaafiqiintii ka qayb gashay arrintaas, taasina waxay muujin in Alle u gargaari addoommadiisa dhawrsoon ee suubban. **[An-Nuur: 22-26].**

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تَدۡخُلُواْ بُيُوتًا غَيۡرَ بُيُوتِكُمۡ حَتَّىٰ تَسۡتَأۡنِسُواْ وَتُسَلِّمُواْ عَلَىٰٓ أَهۡلِهَاۖ ذَٰلِكُمۡ خَيۡرٞ لَّكُمۡ لَعَلَّكُمۡ تَذَكَّرُونَ ٢٧

27. Kuwa (xaqa) rumeeyow ha galina guryo aan kuwiinna ahayn intaad ka idam warsataan kana salaantaan ehelkooda, saasaana idiin khayr roon si aad u xusuusataan.

فَإِن لَّمۡ تَجِدُواْ فِيهَآ أَحَدٗا فَلَا تَدۡخُلُوهَا حَتَّىٰ يُؤۡذَنَ لَكُمۡۖ وَإِن قِيلَ لَكُمُ ٱرۡجِعُواْ فَٱرۡجِعُواْۖ هُوَ أَزۡكَىٰ لَكُمۡۚ وَٱللَّهُ بِمَا تَعۡمَلُونَ عَلِيمٞ ٢٨

28. Haddaydaan ka helin dhexdeeda ruuxna ha galina inta laydinka idmi, haddii laydin dhaha noqdana noqda, saasaa idiin wanaagsan, Alle na waxaad falaysaan wuu og yahay.

لَّيۡسَ عَلَيۡكُمۡ جُنَاحٌ أَن تَدۡخُلُواْ بُيُوتًا غَيۡرَ مَسۡكُونَةٖ فِيهَا مَتَٰعٞ لَّكُمۡۚ وَٱللَّهُ يَعۡلَمُ مَا تُبۡدُونَ وَمَا تَكۡتُمُونَ ٢٩

29. Ma aha korkiinna dhib (dambi) inaad gashaan guryo aan la degganayn oo dan (anfaco) idiinku jirto, Alle wuxuu og yahay waxaad muujinaysaan iyo waxaad qarinaysaan.

قُل لِّلۡمُؤۡمِنِينَ يَغُضُّواْ مِنۡ أَبۡصَٰرِهِمۡ وَيَحۡفَظُواْ فُرُوجَهُمۡۚ ذَٰلِكَ أَزۡكَىٰ لَهُمۡۚ إِنَّ ٱللَّهَ خَبِيرُۢ بِمَا يَصۡنَعُونَ ٣٠

30. Waxaad ku dhahdaa mu'miniinta ha laabeen indhahooda (daymada reeba) hana ka dhawreen furuujtooda (zinada) saasaa u wanaagsan, Alle na wuu og yahay waxay sameyn.

Aayadahani waxay ku tusin wanaagga iyo aadaabta diinta islaamka, oo ah in la dhawro guryaha dadka, oon lana galin idan iyo salaan la'aan, wanaagguna waa saas, haddaan dad joogin lama galo intaad idam ka hesho, haddii noqda laydin dhahana noqda saasaa idiin fiicane, haddayse guryuhu yihiin kuwa aan dad kale deganayn ee ah kuwa dadka u dhexeeya galiddoodu, dambi kaama saarra haddaad gashid. Alle na waa og yahay waxa la muujin iyo waxa la qarinba, wuuna ka abaal marin. Waa in mu'miniintu ka dhawraan indhahooda dayidda xaaraanta ah, taasoo ah daymada haweenkood daydo, iyo in layska ilaaliyo zinada iyo xumaanta, illeen Alle waa og yahay waxa la samayne. Wataas sharafta islaamku iyo nadaafadiisa iyo aadaabtiisa, waxaana meelo badan ku sugnaaday xaaraannimada iska galidda ama fiirinta guryaha dadka, iyo daawashada haweenka, fiirintooda iyo inay tahay leeb ibliis iyo billowga xumaanta, taasina waxay waran ku tahay kuwa iska gala guryaha dadka idam la'aan iyo kuwa iska daawada jidhka haweenka. **[An-Nuur: 27-30].**

31. Waxaad ku dhahdaa (haweenka) mu'minaadka ah, (xaqa rumeeyey): ha laabeen indhahooda hana dhawreen farjigooda, yaanay muujinninna quruxdooda wax muuqda mooyee, hana ku dadeen hagoogtooda dhuuntooda, yayna u muujin quruxdooda raggooda mooyee, iyo aabayoowgood iyo ninkooda aabihiis, iyo wiilashooda iyo wiilasha nimankooda iyo walaalahood iyo wiilasha walaalahood, iyo wiilasha (gabdhahay) walaalaaha yihiin, iyo haweenkooda (muslimka ah) ama waxay hanato midigtoodu (gacantoodu) ama kuwa raaca een dan lahayn (hawo u lahayn) oo ragga ah ama carruurta aan garaneyn cawrada haweenka (shahwana ku dhalan), yeyna kuna garaacin lugahooda (dhulka) in la ogaado waxay qarin oo quruxdooda ah, una toobad keena (u noqda) xagga Alle dhammaan mu'miniineey waxaad u dhawdihiin inaad liibaantaane.

وَقُل لِّلْمُؤْمِنَٰتِ يَغْضُضْنَ مِنْ
أَبْصَٰرِهِنَّ وَيَحْفَظْنَ فُرُوجَهُنَّ وَلَا
يُبْدِينَ زِينَتَهُنَّ إِلَّا مَا ظَهَرَ مِنْهَا ۖ
وَلْيَضْرِبْنَ بِخُمُرِهِنَّ عَلَىٰ جُيُوبِهِنَّ ۖ
وَلَا يُبْدِينَ زِينَتَهُنَّ إِلَّا لِبُعُولَتِهِنَّ أَوْ
ءَابَآئِهِنَّ أَوْ ءَابَآءِ بُعُولَتِهِنَّ أَوْ أَبْنَآئِهِنَّ
أَوْ أَبْنَآءِ بُعُولَتِهِنَّ أَوْ إِخْوَٰنِهِنَّ أَوْ بَنِىٓ
إِخْوَٰنِهِنَّ أَوْ بَنِىٓ أَخَوَٰتِهِنَّ أَوْ نِسَآئِهِنَّ
أَوْ مَا مَلَكَتْ أَيْمَٰنُهُنَّ أَوِ ٱلتَّٰبِعِينَ
غَيْرِ أُو۟لِى ٱلْإِرْبَةِ مِنَ ٱلرِّجَالِ أَوِ ٱلطِّفْلِ
ٱلَّذِينَ لَمْ يَظْهَرُوا۟ عَلَىٰ عَوْرَٰتِ ٱلنِّسَآءِ ۖ
وَلَا يَضْرِبْنَ بِأَرْجُلِهِنَّ لِيُعْلَمَ مَا يُخْفِينَ
مِن زِينَتِهِنَّ ۚ وَتُوبُوٓا۟ إِلَى ٱللَّهِ جَمِيعًا أَيُّهَ
ٱلْمُؤْمِنُونَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿٣١﴾

Aayaddan waxay soo degtay mar haweenku iska soo galeen guriga haweeneey la dhihi jiray Asma binti Marthad iyagoo bannaan laabta oyna tidhi xumaa sidan, waana amar Alle uu faraayo haweenka muslimka ah inay falaan si ay uga soocmaan siday jaahiliintu falayeen oo ah isqaawin iyo muujinta jidhka, waxayna fari aayaddu inay isdhawraan isna asturaan oyna isu muujinnin ragga marka laga reebo kuwa aayaddu taxday ee ah nimanka iyo qaraabada aan guursan karin, iyo kuwaan haweenka dan ka lahayn iyo wiilasha yar yar een

wax eegayn iyo haweenka muslimka ah, waxa la sheegina waa waxa cawrada iyo jidhka hoose ka soo hadhay, illeen kaasi waa ceebe. Miyeyse habboon tahay in lays qaawiyo oo lagu noqdo jaahiliyadii hore wax ka daran, iyadoo cilmi la sheegan, wataas aadaabta islaamka, waana inay is dhawraan oo is ilaaliyaan mu'miniintu rag iyo haweenba, sharaftooda iyo indhahooda iyo jidhkoodana xafitaan si ay u helaan naxariista Alle iyo wanaaggiisa. **[An-Nuur: 31].**

وَأَنكِحُواْ ٱلۡأَيَـٰمَىٰ مِنكُمۡ وَٱلصَّـٰلِحِينَ مِنۡ عِبَادِكُمۡ وَإِمَآئِكُمۡۚ إِن يَكُونُواْ فُقَرَآءَ يُغۡنِهِمُ ٱللَّهُ مِن فَضۡلِهِۦۗ وَٱللَّهُ وَٰسِعٌ عَلِيمٞ ٣٢

32. U guuriya xaaslaawaha idinka mid ah iyo kuwa suubban oo addoommadiinna ah (rag iyo haweenba), hadday sabool yihiin wuxuu ka hodmin Alle fadligiisa, Alle na waa waasac (fadligiisu) waana oge.

وَلۡيَسۡتَعۡفِفِ ٱلَّذِينَ لَا يَجِدُونَ نِكَاحًا حَتَّىٰ يُغۡنِيَهُمُ ٱللَّهُ مِن فَضۡلِهِۦۗ وَٱلَّذِينَ يَبۡتَغُونَ ٱلۡكِتَـٰبَ مِمَّا مَلَكَتۡ أَيۡمَـٰنُكُمۡ فَكَاتِبُوهُمۡ إِنۡ عَلِمۡتُمۡ فِيهِمۡ خَيۡرٗاۖ وَءَاتُوهُم مِّن مَّالِ ٱللَّهِ ٱلَّذِيٓ ءَاتَىٰكُمۡۚ وَلَا تُكۡرِهُواْ فَتَيَـٰتِكُمۡ عَلَى ٱلۡبِغَآءِ إِنۡ أَرَدۡنَ تَحَصُّنٗا لِّتَبۡتَغُواْ عَرَضَ ٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَاۚ وَمَن يُكۡرِههُّنَّ فَإِنَّ ٱللَّهَ مِنۢ بَعۡدِ إِكۡرَٰهِهِنَّ غَفُورٞ رَّحِيمٞ ٣٣

33. Hase dhawrsadeen kuwaan helayn (awood) guur inta Alle kaga hodmin fadligiisa, kuwa dooni inay isfurtaan oo ay hanatay gacantiinnu kitaabeeya (ka oggolaada) haddaad ku ogtihiin khayr, wax ka siiyana xoolaha Alle ee uu idin siiyey, hana ku qasbina gabdhihiinna (aad hanataan) zino hadday doonaan dhawrsooni idinkoo dooni sadka nolosha adduunyada, ciddii qasabta Alle qasabkaas ka dib waa dambi dhaafe naxariista.

وَلَقَدۡ أَنزَلۡنَآ إِلَيۡكُمۡ ءَايَـٰتٖ مُّبَيِّنَـٰتٖ وَمَثَلٗا مِّنَ ٱلَّذِينَ خَلَوۡاْ مِن قَبۡلِكُمۡ وَمَوۡعِظَةٗ لِّلۡمُتَّقِينَ ٣٤

34. Waxaan idiin soo dejinnay aayaad cad cad iyo tusaale kuwii tagay ee idinka horreeyey iyo waanada kuwa dhawrsada.

Diinta islaamku waa diin naxariis iyo isu kaalmayn, sida ka muuqata aayaddan Alle ku fari in loo guuriyo dadka guri la'aanta ah rag iyo haweenba, lana kaalmeeyo dadka dooni inay ka hoos baxaan gacanta iyo inay is dhawrto ciddaan karin kharashka guur inta Alle ka deeqi, iyo inaan la farin haweenka

iyo gabdhaha gacantooda ku hoos jira xumaan iyo zino, isagoo la dooni dhalanteed adduun, Allese waa dambi dhaafe ciddii u toobad keenta, wuxuuna inoo soo dejiyay aayaad cad cad iyo tusaale dadkii hore iyo waanada ciddii dhawrsata. Taasina waxay ku tusin in islaamku yahay diin caddaalad, isu kaalmayn, nadaafo, sharaf iyo dhawrsooni, islaamkuna markuu u yeedhi in la xoreeyo dadka gacan ku hoos jira oo ah ruux maxaad maleyn kuwa gaalada ah ee addoonsada dad, haddana qaylyi ama islaamka xoraynta fari wax ka sheegi, waa doqommo indha la', oon fikirayn, waxaase ka sii xun kuwa u durbaan tumi kuwaas. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: dhallin yarooy ciddii karta kharash guurka ha guursato, isagaa isha laabid badane oo farjiga dhawrid badane, ciddaan karinna waxaa saaran soon si uu u fududeeyo himmada. Inse laga tago guurka isagoo la dano sheegan, haddana wax la qasto oo la meeraysto taasi islaamku ma oggala mana bannaana. **[An-Nuur: 32-34].**

35. Alle waa hanuuniyaha ehelka samooyinka iyo dhulka, nuurkiisu wuxuu la mid yahay daaqad misbaax ku jiro, misbaaxuna ku jiro dhalo, dhaladana aad mooddo xiddig ifi lagana huriyey geed la barakeeyay oo ah zaytuun (saliid leh) oon bari iyo galbeed midna ahayn, waxayna u dhawdahay saliiddeedu inay iska ifto yuuna taabanninba dabe, waa nuur lagu kordhiyay nuur, wuxuuna ku hanuuniyaa Alle nuurkiisa cidduu doono, wuxuuna u yeelaa Alle dadka tusaale, Alle na wax kasta waa og yahay.

* ٱللَّهُ نُورُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ مَثَلُ نُورِهِۦ كَمِشْكَوٰةٍ فِيهَا مِصْبَاحٌ ۖ ٱلْمِصْبَاحُ فِى زُجَاجَةٍ ۖ ٱلزُّجَاجَةُ كَأَنَّهَا كَوْكَبٌ دُرِّىٌّ يُوقَدُ مِن شَجَرَةٍ مُّبَٰرَكَةٍ زَيْتُونَةٍ لَّا شَرْقِيَّةٍ وَلَا غَرْبِيَّةٍ يَكَادُ زَيْتُهَا يُضِىٓءُ وَلَوْ لَمْ تَمْسَسْهُ نَارٌ ۚ نُّورٌ عَلَىٰ نُورٍ ۚ يَهْدِى ٱللَّهُ لِنُورِهِۦ مَن يَشَآءُ ۚ وَيَضْرِبُ ٱللَّهُ ٱلْأَمْثَٰلَ لِلنَّاسِ ۗ وَٱللَّهُ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمٌ ﴿٣٥﴾

36. (Kaasoo ah) guryo (masaajidda) uu idmay Alle in la koryeelo laguna xuso dhexdeeda magaciisa, waxaana ugu tasbiixsada dhexdeeda aroor iyo galabba.

فِى بُيُوتٍ أَذِنَ ٱللَّهُ أَن تُرْفَعَ وَيُذْكَرَ فِيهَا ٱسْمُهُۥ يُسَبِّحُ لَهُۥ فِيهَا بِٱلْغُدُوِّ وَٱلْءَاصَالِ ﴿٣٦﴾

رِجَالٌ لَّا تُلْهِيهِمْ تِجَٰرَةٌ وَلَا بَيْعٌ عَن ذِكْرِ ٱللَّهِ وَإِقَامِ ٱلصَّلَوٰةِ وَإِيتَآءِ ٱلزَّكَوٰةِ يَخَافُونَ يَوْمًا تَتَقَلَّبُ فِيهِ ٱلْقُلُوبُ وَٱلْأَبْصَٰرُ ﴿٣٧﴾

37. Rag ayna ka shuqlinayn ganacsi iyo gadid xuska Alle, oogidda salaadda iyo bixinta zakada, kana cabsan maalinoy gagaddoomi dhexdeeda quluubta iyo aragguba.

لِيَجْزِيَهُمُ ٱللَّهُ أَحْسَنَ مَا عَمِلُوا۟ وَيَزِيدَهُم مِّن فَضْلِهِۦ ۗ وَٱللَّهُ يَرْزُقُ مَن يَشَآءُ بِغَيْرِ حِسَابٍ ﴿٣٨﴾

38. Inuu ka abaal mariyo Alle wanaaggay faleen una kordhiyo fadligiisa, Alle na wuu arzuqaa cidduu doono xisaab la'aan.

Nuurka Alle waynaaye yey la ifaan samooyinka iyo dhulka, wuxuuna ku hanuuniyaa nuurkaas cidduu doono, waana tusaale Alle qaddaray. Xadiithna waxaa ku sugnaaday: waxaan magan gali nuurka wajigaaga oy u iftay mugdiyadu (Allow). Masaajidda Alle ee uu idmay in la sharrifo oo la koryeelana lagu xuso magaciisa waqti kasta waxaa ku dadaala dad ayna ka shuqlinin xusidda Alle, salaadda, iyo zakada gancsi iyo gadid midna, iyagoo ka cabsan maalin qalbiga iyo araggu gagadoomo, qiyaamada, iyagoo rajayn in Alle wanaag ku abaal mariyo, masaajidda xaalkooduna waa wayn yahay waana meelaha nuurka islaamku ka billowday Alle na ugu jecel yahay, waana in la dhiso, lana camiro, waxna lagu barto cibaadada kale ka sokow, waxaana ku soo arooray fadliga cidda dhista ama cammirta ama u dadaasha wanaagyo badan, waxaana ka mid ah: ruuxii dhisa masaajid isagoo dar Alle u dhisi wuxuu Alle uga dhisaa jannada isagoo kale. Caa'ishana waxay tidhi: wuxuu na faray Rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) in laga dhiso masaajidda xaafadaha lana nadiifiyo, lana udgiyo. **[An-Nuur: 35-38].**

وَٱلَّذِينَ كَفَرُوٓا۟ أَعْمَٰلُهُمْ كَسَرَابٍۭ بِقِيعَةٍ يَحْسَبُهُ ٱلظَّمْـَٔانُ مَآءً حَتَّىٰٓ إِذَا جَآءَهُۥ لَمْ يَجِدْهُ شَيْـًٔا وَوَجَدَ ٱللَّهَ عِندَهُۥ فَوَفَّىٰهُ حِسَابَهُۥ ۗ وَٱللَّهُ سَرِيعُ ٱلْحِسَابِ ﴿٣٩﴾

39. Kuwii gaaloobay camalkoodu wuxuu la mid yahay dhalanteed dhul siman (ka muuqda) oos u malayn kan oommani biyo markuu yimaadana uuna ka helayn waxba, oo uu ka heli Alle (abaal marintiisa) agtiisa una oofiyey xisaabtiisa, Alle na way deg degtaa xisaabtiisu.

أَوْ كَظُلُمَٰتٍ فِى بَحْرٍ لُّجِّىٍّ يَغْشَىٰهُ مَوْجٌ مِّن فَوْقِهِۦ مَوْجٌ مِّن فَوْقِهِۦ سَحَابٌ

40. Ama wuxuu la mid yahay mugdiyo bad dhexdeed ah oos dabooli hir korkiisana yahay

hir, korkiisana tahay daruur, waa mugdiyo qaarkood qaar ka sarreeyo hadduu bixiyo gacantiisana uma dhawa inuu arko, ruuxaan Alle u yeelin nuur malaha nuur.

ظُلُمَٰتٌۢ بَعۡضُهَا فَوۡقَ بَعۡضٍ إِذَآ أَخۡرَجَ يَدَهُۥ لَمۡ يَكَدۡ يَرَىٰهَاۗ وَمَن لَّمۡ يَجۡعَلِ ٱللَّهُ لَهُۥ نُورٗا فَمَا لَهُۥ مِن نُّورٍ ٤٠

41. Miyaadan ogayn in Alle ay u tasbiixsadaan waxa ku sugan samooyinka iyo dhulka iyo shimbiraha oo (fidsan) safan, mid kasta wuu og yahay salaaddiisa iyo tasbiixdiisa, Alle na waa og yahay waxay fali.

أَلَمۡ تَرَ أَنَّ ٱللَّهَ يُسَبِّحُ لَهُۥ مَن فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ وَٱلطَّيۡرُ صَٰٓفَّٰتٖۖ كُلّٞ قَدۡ عَلِمَ صَلَاتَهُۥ وَتَسۡبِيحَهُۥۗ وَٱللَّهُ عَلِيمُۢ بِمَا يَفۡعَلُونَ ٤١

42. Alle waxaa u sugnaaday xukunka samooyinka iyo dhulka xagga Alle ayaana loo ahaan.

وَلِلَّهِ مُلۡكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۖ وَإِلَى ٱللَّهِ ٱلۡمَصِيرُ ٤٢

Markay aayadaha hore ka warrameen nuurka Alle iyo iimaanka iyo jidka wanaagga ee uu ku hanuuniyey mu'miinta, iyo masaajidda, iyo in kuwayna shuqlinin adduunyadu ay ku cibaadaystaan sharrifaanna yaa halkan lagu sheegay in camalka gaaladu la mid yahay dhalanteed oomman biyo mooday meel cidla ah oo oomana ah, markuu dhintana uu la kulmi Alle una oofin abaalkiisa, illeen mugdiyo baadiyuu ku sugnaaye, nuurna Alle uma yeeline, Alle na kuwaas waa ka kaaftoon yahay illeen waxaa wayneeya oo caabuda waxa cirka iyo dhulka ku sugan, xaataa shinbiraha duuli, hawada sare, isagoo Alle wax walba og, wax walbana xaggiisa u ahaan, waxaa sugnaaday in yuhuud lagu dhihi qiyaamada: maxaad caabudayseen? oy dhihi: waxaan caabudaynay Cuzayr ina Ilaah, markaasaa lagu dhihi been baad sheegteen, Alle ilmo ma yeelanin, ee maxaad rabtaan, waxayna odhan: Allow waannu oonnaye ee na waraabi markaasaa la dhihi miyeydaan arkayn, naartaana ugu muuqata dhalanteed oo qaarkood qaar buuran markaasay isku tuurayaan.

Alle Ayaan ka magan galnay, halkaasayna jiraan liibaan iyo khasaare, liibaanta mu'miinta iyo khasaaraha gaalada, waana arrin mudan u darbasho. **[An-Nuur: 39-42].**

43. Miyeydaan arkayn in Alle kexeeyo daruuro markaas isu dumo kana yeelo mid is dul saaran ood aragto roobkoo ka

أَلَمۡ تَرَ أَنَّ ٱللَّهَ يُزۡجِي سَحَابٗا ثُمَّ يُؤَلِّفُ بَيۡنَهُۥ ثُمَّ يَجۡعَلُهُۥ رُكَامٗا فَتَرَى ٱلۡوَدۡقَ يَخۡرُجُ مِنۡ خِلَٰلِهِۦ

soo bixi dhexdiisa wuxuuna ka soo dejiyaa (Alle) samada buuro qabow ah xaggood: (baraf) wuxuuna gaadhsiiyaa cidduu doono, wuxuu ka iilaa qofkuu doono, wuxuuna u dhaw yahay nuurka hillaaciisu inuu la tago aragga.

وَيُنَزِّلُ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مِن جِبَالٍ فِيهَا مِنۢ بَرَدٍ فَيُصِيبُ بِهِۦ مَن يَشَآءُ وَيَصۡرِفُهُۥ عَن مَّن يَشَآءُۖ يَكَادُ سَنَا بَرۡقِهِۦ يَذۡهَبُ بِٱلۡأَبۡصَٰرِ ﴿٤٣﴾

44. Wuu gagadiyaa Alle habeenka iyo dharaarta, arrintaasna waano qaadasho yaa ugu sugan kuwa aragga leh (caqliga leh).

يُقَلِّبُ ٱللَّهُ ٱلَّيۡلَ وَٱلنَّهَارَۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَعِبۡرَةٗ لِّأُوْلِي ٱلۡأَبۡصَٰرِ ﴿٤٤﴾

45. Alle ayaa ka abuuray wax kastoo socda (oo nool) biyo waxaana ka mid ah mid ku socda calooshiisa, waxaana ka mid ah mid ku socda labo lugood, waxaana ka mid ah mid ku socda afar, wuxuu abuuraa Alle wuxuu doono, Alle na wax kasta waa karaa.

وَٱللَّهُ خَلَقَ كُلَّ دَآبَّةٖ مِّن مَّآءٖۖ فَمِنۡهُم مَّن يَمۡشِي عَلَىٰ بَطۡنِهِۦ وَمِنۡهُم مَّن يَمۡشِي عَلَىٰ رِجۡلَيۡنِ وَمِنۡهُم مَّن يَمۡشِي عَلَىٰٓ أَرۡبَعٖۚ يَخۡلُقُ ٱللَّهُ مَا يَشَآءُۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَيۡءٖ قَدِيرٞ ﴿٤٥﴾

46. Waxaan soo dejinnay aayaad cad cad, Alle na wuxuu ku hanuuniyaa cidduu doono jid toosan.

لَّقَدۡ أَنزَلۡنَآ ءَايَٰتٖ مُّبَيِّنَٰتٖۚ وَٱللَّهُ يَهۡدِي مَن يَشَآءُ إِلَىٰ صِرَٰطٖ مُّسۡتَقِيمٖ ﴿٤٦﴾

Roobku wuxuu ku jiraa awoodda Alle, isagaana kulmiya daruuraha kana keena roobka meeshuu doonana ku da'siiya, habeenka iyo maalintana Alle ayaa ku tasarrufa inay ku waana qaataan kuwa wax garadka ah, wax kasta oo nafley ahna oo socda Alle ayaa biyo ka abuuray, mid bog ku socda, mid labo ku socda iyo mid afar ku socdaba, wuxuu doonana wuu abuuraa, wax walbana waa karaa, wuxuuna soo dejiyay aayaad cad cad, cidduu doonana wuxuu ku toosiyaa jidka toosan. Taasina waxay sugi in Alle wax walba og yahay awooddana leeyahay, biyahana laga abuuray naflayda, kalana duway socodkooda iyo abuurkooda, wuxuu doona uu abuuri, waxayna aamusiin gaalada, mulxidiinta, jaahiliinta iyo kuwa rumeeya oo raaca kuwaas. **[An-Nuur: 43-46].**

47. Waxay dhihi (munaafiqiintu) waxaan rumeeynay Alle iyo

وَيَقُولُونَ ءَامَنَّا بِٱللَّهِ وَبِٱلرَّسُولِ وَأَطَعۡنَا

Rasuulka waana adeecnay markaasaa waxaa jeedsada kooxo ka mid ah intaas ka dib, kuwaasi ma aha mu'miniin.

ثُمَّ يَتَوَلَّىٰ فَرِيقٌ مِّنْهُم مِّنۢ بَعْدِ ذَٰلِكَ ۚ وَمَآ أُو۟لَٰٓئِكَ بِٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٤٧﴾

48. Marka loogu yeedho Alle iyo Rasuulkiisa inuu kala xukumo dhexdooda waxaa soo baxa koox ka mid ah oo jeedsan.

وَإِذَا دُعُوٓا۟ إِلَى ٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ لِيَحْكُمَ بَيْنَهُمْ إِذَا فَرِيقٌ مِّنْهُم مُّعْرِضُونَ ﴿٤٨﴾

49. Hadduu xaqu iyaga u sugnaado way u yimaadaan iyagoo adeeci.

وَإِن يَكُن لَّهُمُ ٱلْحَقُّ يَأْتُوٓا۟ إِلَيْهِ مُذْعِنِينَ ﴿٤٩﴾

50. Ma qalbigay ka bukaan mise way shakiyeen mise waxay ka cabsan in Alle ku jawr falo iyo Rasuulkiisu, saas ma aha ee kuwaasu waa kuwo daalimiin ah.

أَفِى قُلُوبِهِم مَّرَضٌ أَمِ ٱرْتَابُوٓا۟ أَمْ يَخَافُونَ أَن يَحِيفَ ٱللَّهُ عَلَيْهِمْ وَرَسُولُهُۥ ۚ بَلْ أُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلظَّٰلِمُونَ ﴿٥٠﴾

51. Mu'minka hadalkiisu marka loogu yeedho Alle iyo Rasuulkiisu inuu kala xukumo dhexdooda waa uun inay dhahaan waan maqallay waana adeecnay kuwaasuna waa uun kuwa liibaanay.

إِنَّمَا كَانَ قَوْلَ ٱلْمُؤْمِنِينَ إِذَا دُعُوٓا۟ إِلَى ٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ لِيَحْكُمَ بَيْنَهُمْ أَن يَقُولُوا۟ سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا ۚ وَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْمُفْلِحُونَ ﴿٥١﴾

52. Ciddii adeecda Alle iyo Rasuulkiisa oo cabsata kana dhawrsata kuwaasi waa uun kuwa liibaanay.

وَمَن يُطِعِ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ وَيَخْشَ ٱللَّهَ وَيَتَّقْهِ فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْفَآئِزُونَ ﴿٥٢﴾

Munaafiqiintu had iyo jeer waa col kugu dhex jira iyo dhiqle muslimiinta xasilka u diida, afkana waxay ka sheegaan inay xaqa rumeeyeen, haddana way ka jeedaan xaqa, marka loogu yeedho in xaqa lagu kala xukumo way jeedsan, hadday u fili in iyaga loo xukumina way yimaadaan iyagoo adeeci oo maqli, taasna waxaa ugu wacan inay qalbiga ka bukaan shakina kaga jiro caddaaladda Alle iyo Rasuulkiisa, waana daalimiin, mu'miniintuse way maqli oy adeeci marka loogu yeedho xukunka Alle iyo Rasuulkiisa, waana kuwa liibaanay ee adeecay Alle iyo Rasuulka, Alle na ka cabsada kana dhawrsada, waana kaas

xumida diiddada sharciga Alle iyo u hoggaansankiisa, wax xukunka Alle la mid ah ama ku dhawna ma jiro, waana in lagu dhaqmo. **[An-Nuur: 47-52].**

53. Waxay ugu dhaarteen Alle (munaafiqiinta) dhaar daran inay u baxaan (jihaad) waxaad dhahdaa ha dhaarannina, addeecid la yaqaan (ha ahaado xaalkiinnu) Alle na waa og yahay waxaad falaysaan.

* وَأَقْسَمُوا۟ بِٱللَّهِ جَهْدَ أَيْمَـٰنِهِمْ لَئِنْ أَمَرْتَهُمْ لَيَخْرُجُنَّ ۖ قُل لَّا تُقْسِمُوا۟ ۖ طَاعَةٌ مَّعْرُوفَةٌ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ خَبِيرٌۢ بِمَا تَعْمَلُونَ ﴿٥٣﴾

54. Waxaad dhahdaa addeeca Alle oo addeeca Rasuulka haddaad jeedsataanna waxaa uun korkiisa ah (Nabiga) waxa la saaray (la faray) idinkana waxaa korkiinna ah waxa laydin saaray (xaq raacid) haddaad addeecdaan (Nabiga) waad hanuunaysaan, Rasuulkana ma saarra waxaan gaadhsiin cad ahayn.

قُلْ أَطِيعُوا۟ ٱللَّهَ وَأَطِيعُوا۟ ٱلرَّسُولَ ۖ فَإِن تَوَلَّوْا۟ فَإِنَّمَا عَلَيْهِ مَا حُمِّلَ وَعَلَيْكُم مَّا حُمِّلْتُمْ ۖ وَإِن تُطِيعُوهُ تَهْتَدُوا۟ ۚ وَمَا عَلَى ٱلرَّسُولِ إِلَّا ٱلْبَلَـٰغُ ٱلْمُبِينُ ﴿٥٤﴾

55. Wuxuu u yaboohay Alle kuwa rumeeyay xaqa oo camal fiican falay inuu u reebo dhulka siduu ugu reebay kuwii ka horreeyay, wuxuuna makanin diintooda uu uga raalli noqday wuxuuna ugu badali cabsidooda ka dib nabadgalyo, wayna i caabudi ilamana wadaajiyaan waxba, ciddii gaalowda intaas ka dibna kuwaasu waa uun faasiqiin.

وَعَدَ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ مِنكُمْ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّـٰلِحَـٰتِ لَيَسْتَخْلِفَنَّهُمْ فِى ٱلْأَرْضِ كَمَا ٱسْتَخْلَفَ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ وَلَيُمَكِّنَنَّ لَهُمْ دِينَهُمُ ٱلَّذِى ٱرْتَضَىٰ لَهُمْ وَلَيُبَدِّلَنَّهُم مِّنۢ بَعْدِ خَوْفِهِمْ أَمْنًا ۚ يَعْبُدُونَنِى لَا يُشْرِكُونَ بِى شَيْـًٔا ۚ وَمَن كَفَرَ بَعْدَ ذَٰلِكَ فَأُو۟لَـٰٓئِكَ هُمُ ٱلْفَـٰسِقُونَ ﴿٥٥﴾

Munaafiqiin wax badan yey been ku dhaartaan, waxaase u wanaagsan raacid xaq iyo addeecid, cid walbana waxaa laga rabaa waxa la saaray, aayadda kale waxay ka hadli in Alle u yaboohay mu'miniinta inay dhulka u hadhi oy xukumi hadday xaqa rumeeyaan, wanaagna falaan, markaasuu makanin diintooda uu ka raalli noqday cabsidana ammaan ugu badali, Alle kaliyana ay caabudi, wuuna

u rumoobay mu'miniintii hore yabooha Alle, markay xaqa raaceen oo sharciga Alle isku dhaqeen, ciddii saas fashana wuu u gargaari Alle waqti kasta. Waxaa laga wariyey Cadi binu Xaatim inuu Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) u yimid uuna ku yidhi: ma taqaan Xiira, oo yidhi: ma aqaan waanse maqlay, oo Nabigu yidhi: (Alle Ayaan ku dhaartaye wuu taam yeeli Alle diintan inta haweenaydu ka baxdo Xiira oy ka dawaafto baydka iyadoon cidna hoos galin, waxaana la furan kansiga Kisre binu Hurmus markaasaan idhi: Kisre binu Hurmus? markaasuu yidhi: haa, Kisre binu Hurmus, wuxuu yidhi Cadi: wataas haweenaydu iska dawaafi baydka iyadoo Xiira ka soo tagtay nabadgalyo, waxaanan ka mid ahaa dadkii wax ka furtay kansigii Kisre binu Hurmus, wallee tii seddexaad ee Nabigu sheegayna waa la heli. Waxaa kale oo sugnaaday: ugu bishaaree umaddan sharaf, sarreyn, diin, gargaar iyo makanid dhulka, markay toosaan. **[An-Nuur: 53-55].**

وَأَقِيمُواْ ٱلصَّلَوٰةَ وَءَاتُواْ ٱلزَّكَوٰةَ وَأَطِيعُواْ ٱلرَّسُولَ لَعَلَّكُمۡ تُرۡحَمُونَ ﴿٥٦﴾

56. Ooga salaadda, bixiya zakada oo addeeca Rasuulka waxaad mudan tihiin in laydiin naxariistee.

لَا تَحۡسَبَنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ مُعۡجِزِينَ فِي ٱلۡأَرۡضِۚ وَمَأۡوَىٰهُمُ ٱلنَّارُۖ وَلَبِئۡسَ ٱلۡمَصِيرُ ﴿٥٧﴾

57. Hana u malayn kuwa gaaloobay inay ku daalin (Alle) dhulka, guryahooduna (ay aakhiro u hoyan) waa naar waxaana u xun meel loo ahaado (naar).

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لِيَسۡتَـٔۡذِنكُمُ ٱلَّذِينَ مَلَكَتۡ أَيۡمَٰنُكُمۡ وَٱلَّذِينَ لَمۡ يَبۡلُغُواْ ٱلۡحُلُمَ مِنكُمۡ ثَلَٰثَ مَرَّٰتٖۚ مِّن قَبۡلِ صَلَوٰةِ ٱلۡفَجۡرِ وَحِينَ تَضَعُونَ ثِيَابَكُم مِّنَ ٱلظَّهِيرَةِ وَمِنۢ بَعۡدِ صَلَوٰةِ ٱلۡعِشَآءِۚ ثَلَٰثُ عَوۡرَٰتٖ لَّكُمۡۚ لَيۡسَ عَلَيۡكُمۡ وَلَا عَلَيۡهِمۡ جُنَاحُۢ بَعۡدَهُنَّۚ طَوَّٰفُونَ عَلَيۡكُم بَعۡضُكُمۡ عَلَىٰ بَعۡضٖۚ كَذَٰلِكَ يُبَيِّنُ ٱللَّهُ لَكُمُ ٱلۡأٓيَٰتِۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٞ ﴿٥٨﴾

58. Kuwa xaqa rumeeyow haydin idan warsadeen kuway hanatay gacantiinnu, iyo kuwaan qaan gaadhin oo idinka mid ah saddex jeer, salaadda subax ka hor iyo markaad iska dhigtaan dharka duhurkii, iyo salaadda cishaha kadib, waa saddex waqti oo cawro ah (la nasto), ma aha korkiinna iyo korkooda midna dhib (ma saarra) intaas ka dib, way idin kor socdaan (shaqeeyaan), qaarkiinna qaarbuu u socdaa, saasuuna idiinku caddayn Alle aayaadkiisa Alle na waa oge falsan.

59. Markay carruurtiinnu qaangaadhana haydin idan warsadeen siday idiin idam warsadeen kuwii ka horreeyay, saasuuna idiinku caddayn Alle aayaadkiisa, Alle na waa oge falsan.

وَإِذَا بَلَغَ ٱلْأَطْفَٰلُ مِنكُمُ ٱلْحُلُمَ فَلْيَسْتَـْٔذِنُوا۟ كَمَا ٱسْتَـْٔذَنَ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ ۚ كَذَٰلِكَ يُبَيِّنُ ٱللَّهُ لَكُمْ ءَايَٰتِهِۦ ۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴿٥٩﴾

60. Kuwa ka fadhiistay (ka quustay dhalmada) oo haweenka ah oon guur rajaynayn (da' darteed) korkooda dhib (dambi) ma saarra inay iska dhigaan dharkooda (iska fududeeyaan) iyagoon ismuujinayn qurux, inay dhawrsadaan yaase u khayr roon Alle na waa maqle og.

وَٱلْقَوَٰعِدُ مِنَ ٱلنِّسَآءِ ٱلَّٰتِى لَا يَرْجُونَ نِكَاحًا فَلَيْسَ عَلَيْهِنَّ جُنَاحٌ أَن يَضَعْنَ ثِيَابَهُنَّ غَيْرَ مُتَبَرِّجَٰتٍۭ بِزِينَةٍ ۖ وَأَن يَسْتَعْفِفْنَ خَيْرٌ لَّهُنَّ ۗ وَٱللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿٦٠﴾

Oogidda salaadda, bixinta zakada, iyo addeecidda Rasuulka waa sababaha naxariista, wax Alle daalinna ma jiro, gaalana wuxuu ku abaal marin naar. Aayadaha kale waxay ka warrami in guryaha galiddooda la dhawro gaar ahaan saddex waqti oo cid kasta laga rabo inay idan warsadaan, xataa dadka gacantooda ku hoos nool, carruurtuna mar hadday qaangaadho waa inay idam warsadaan. Haweenka duqoobayna hadday dharka iska fududeeyaan wax ma saarra haddayna cawro faydayn ama isqurxinayn, waxaase fiican is asturka. **[An-Nuur: 56-60].**

61. Ma saarra indhoole dhib, lugoolana dhib ma saarra, mid bukana dhib ma saarra, naftiinnana dhib ma saarra inaad wax ka cuntaan guryinhiinna ama guryaha aabayaalkiin, ama guryaha hooyooyinkiin, ama guryaha walaalihiin, ama guryaha abbaayayaalkiin, ama guryaha adeerradiin, ama guryaha eeddooyinkiin, ama guryaha

لَّيْسَ عَلَى ٱلْأَعْمَىٰ حَرَجٌ وَلَا عَلَى ٱلْأَعْرَجِ حَرَجٌ وَلَا عَلَى ٱلْمَرِيضِ حَرَجٌ وَلَا عَلَىٰٓ أَنفُسِكُمْ أَن تَأْكُلُوا۟ مِنۢ بُيُوتِكُمْ أَوْ بُيُوتِ ءَابَآئِكُمْ أَوْ بُيُوتِ أُمَّهَٰتِكُمْ أَوْ بُيُوتِ إِخْوَٰنِكُمْ أَوْ بُيُوتِ أَخَوَٰتِكُمْ أَوْ بُيُوتِ أَعْمَٰمِكُمْ أَوْ بُيُوتِ عَمَّٰتِكُمْ أَوْ بُيُوتِ أَخْوَٰلِكُمْ أَوْ بُيُوتِ خَٰلَٰتِكُمْ

أَوْ مَا مَلَكْتُم مَّفَاتِحَهُۥٓ أَوْ صَدِيقِكُمْ ۚ لَيْسَ عَلَيْكُمْ جُنَاحٌ أَن تَأْكُلُوا۟ جَمِيعًا أَوْ أَشْتَاتًا ۚ فَإِذَا دَخَلْتُم بُيُوتًا فَسَلِّمُوا۟ عَلَىٰٓ أَنفُسِكُمْ تَحِيَّةً مِّنْ عِندِ ٱللَّهِ مُبَٰرَكَةً طَيِّبَةً ۚ كَذَٰلِكَ يُبَيِّنُ ٱللَّهُ لَكُمُ ٱلْءَايَٰتِ لَعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ ﴿٦١﴾

abtiyadiin, ama guryaha habaryarihiin, ama guryahaad hanataan furihiisa, ama guryaha saaxiibahiin, dhibna idinma saarra inaad wax cuntaan idinkoo kooxa ah ama kala tagsan, markaad gashaan guryana salaama naftiinna, salaan ka ahaatay Alle xaggiisa oo la barakeeyey oo fiican, saasuuna idiinku caddayn Alle aayaadka inaad wax kastaan.

إِنَّمَا ٱلْمُؤْمِنُونَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ بِٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ وَإِذَا كَانُوا۟ مَعَهُۥ عَلَىٰٓ أَمْرٍ جَامِعٍ لَّمْ يَذْهَبُوا۟ حَتَّىٰ يَسْتَـْٔذِنُوهُ ۚ إِنَّ ٱلَّذِينَ يَسْتَـْٔذِنُونَكَ أُو۟لَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ يُؤْمِنُونَ بِٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ ۚ فَإِذَا ٱسْتَـْٔذَنُوكَ لِبَعْضِ شَأْنِهِمْ فَأْذَن لِّمَن شِئْتَ مِنْهُمْ وَٱسْتَغْفِرْ لَهُمُ ٱللَّهَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٦٢﴾

62. Mu'miniintu waa uun kuwa rumeeyey Alle iyo Rasuulkiisa, markay la joogaan Nabiga amar kulmiyey dartiisna aan tagin intay ka idan warsadaan, kuwa idan warsada kuwaasu waa kuwa rumeeya Alle iyo Rasuulkiisa, ee hadday kaa idan warsadaan danahooda qaarkood u idan ciddaad doonto oo ka mid ah una dambi-dhaaf warso Alle, Ilaahay waa dambi dhaafe naxariistee.

Aayadahanna waxay ka warrami aadaabo kale iyo inay bannaan tahay in wax lala cuno dadka naafada ah iyo kuwa buka, waxna laga cuno guryaha qaraabada iyo saaxiibbada iyo kuwaad hanataan furahoodaba, sidoo kale in koox koox wax loo cuno ama kali kali iyo in laysa salaamo marka la gali guryaha, waxaa soo dhanna waa wax Alle u caddayn si ay u ogaadaan, taasina waxay ku tusin sida diinta islaamku wax walba oo dani ku jirto u caddaysay, aayadda kalana waxay caddayn inay ahaayeen mu'miniintii dhabta ahaa kuwaan ka tagin kulanka Nabiga iyagoon idan warsan, Nabiguna wuu idmi jiray cidday la noqoto, taasina waxay muujin in laga murgo danaha muslimiinta oon lana ganta furin ee la dhawro isku xidhnaantooda iyo danahooda. **[An-Nuur: 61-62].**

لَّا تَجْعَلُوا۟ دُعَآءَ ٱلرَّسُولِ بَيْنَكُمْ

63. Ha ka yeelina u yeedhidda Rasuulka sida u yeedhidda

كَدُعَآءِ بَعۡضِكُم بَعۡضٗاۚ قَدۡ يَعۡلَمُ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ يَتَسَلَّلُونَ مِنكُمۡ لِوَاذٗاۚ فَلۡيَحۡذَرِ ٱلَّذِينَ يُخَالِفُونَ عَنۡ أَمۡرِهِۦٓ أَن تُصِيبَهُمۡ فِتۡنَةٌ أَوۡ يُصِيبَهُمۡ عَذَابٌ أَلِيمٌ ٦٣

qaarkiin qaar, Alle wuu og yahay kuwa dusi iyagoo gabban (fadhiga Nabiga), ha ka digtoonaadeen kuwa khilaafi amarka Nabiga (sunnadiisa iyo shareecadiisa) inay ku dhacdo fidmo (masiibo) ama ku dhoco cadaab daran.

أَلَآ إِنَّ لِلَّهِ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۖ قَدۡ يَعۡلَمُ مَآ أَنتُمۡ عَلَيۡهِ وَيَوۡمَ يُرۡجَعُونَ إِلَيۡهِ فَيُنَبِّئُهُم بِمَا عَمِلُواْۗ وَٱللَّهُ بِكُلِّ شَيۡءٍ عَلِيمُۢ ٦٤

64. Alle ayaa iska leh waxa ku sugan samooyinka iyo dhulka, waana og yahay waxaad ku sugan tihiin, iyo maalinta loo celin xaggiisa, oo uu uga warrami waxay camal faleen, Alle na wax kasta waa og yahay.

Ibnu Cabbaas wuxuu sheegay in asaxaabtii ay Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ugu yeedhi jireen si caadi ah oo magaciisa ah markaasaa Alle faray inay qadariyaan oo ugu yeedhaan si haybad leh, Alle na waa og yahay munaafiqiinta ka dusi jiray fadhiga Nabiga, dadkuna haka digtoonaadeen khilaafka amarka Nabiga, taasoo fidmo iyo dhib ka dhalan ama cadaab daran, Alle na waxaa u sugnaaday xukunka iyo awoodda khalqiga, wuuna og yahay waxay ku sugnaan adduun iyo aakhiraba, wuuna abaal marin aayadduna waxay uga digi dadka khilaafka Nabiga iyo inaan lala imaan wuxuusan idmin. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: ruuxii fala camal aan ahayn amarkannaga waa lagu celin. Waxaa weriyay Muslim.

Suuraddanna waa suurad wayn oo ka warranta aadaab wayn, sida ilaalinta carrabka, iska ilaalinta zinada, dhawridda sharafta muslimiinta iyo dadka, dhawridda galidda guryaha dadka, isa salaamidda, indha laabashada ragga iyo haweenka, is asturidda haweenka iyo ilaalintooda sharftooda, qiimaha islaamka iyo iimaanka, awoodda Alle, caddaaladda iyo raacidda xaqa, in muslimiinta toosan u hadhi dhulka, dhawridda danaha iyo fadhiga muslimiinta, ixtiraamka Nabiga iyo raacidda amarkiisa. Saas darteed yaa cumar binu khadhaab u fari jiray muslimiinta inay haweenkooda baraan suuraddan, suuratu nuur. **[An-Nuur: 63-64].**

Suurat Al-Furqaan

سُورَةُ الفُرقَانِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaa khayr batay (oo wayn) Allaha ku soo dejiyey quraanka addoonkiisii (Nabiga) inuu u ahaado caalamka u dige.

تَبَارَكَ ٱلَّذِي نَزَّلَ ٱلۡفُرۡقَانَ عَلَىٰ عَبۡدِهِۦ لِيَكُونَ لِلۡعَٰلَمِينَ نَذِيرًا ١

2. Allaha uu u sugnaaday hanashada iyo xukunka samooyinka iyo dhulka, yeelaninna ilmo una sugnaannin shariig (la wadaage) xukunka, abuurayna wax kasta, oo u ahaysiiyey si qiyaasan.

ٱلَّذِي لَهُۥ مُلۡكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ وَلَمۡ يَتَّخِذۡ وَلَدٗا وَلَمۡ يَكُن لَّهُۥ شَرِيكٞ فِي ٱلۡمُلۡكِ وَخَلَقَ كُلَّ شَيۡءٖ فَقَدَّرَهُۥ تَقۡدِيرٗا ٢

3. Waxay ka yeesheen Alle ka sokow ilaahyo oon abuurayn waxba iyagana la abuuri una hananayn naftooda dhib iyo nacfi (midna) oonan hananayn geeri iyo nolol iyo soo bixin (midna).

وَٱتَّخَذُواْ مِن دُونِهِۦٓ ءَالِهَةٗ لَّا يَخۡلُقُونَ شَيۡـٔٗا وَهُمۡ يُخۡلَقُونَ وَلَا يَمۡلِكُونَ لِأَنفُسِهِمۡ ضَرّٗا وَلَا نَفۡعٗا وَلَا يَمۡلِكُونَ مَوۡتٗا وَلَا حَيَوٰةٗ وَلَا نُشُورٗا ٣

4. Waxay dheheen gaaladii kani (quraanku) ma aha waxaan been abuur ahayn, uu la yimid, uguna kaalmeeyeen qoom kale, waxay la yimaadeen dulmi iyo been (daran).

وَقَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓاْ إِنۡ هَٰذَآ إِلَّآ إِفۡكٌ ٱفۡتَرَىٰهُ وَأَعَانَهُۥ عَلَيۡهِ قَوۡمٌ ءَاخَرُونَۖ فَقَدۡ جَآءُو ظُلۡمٗا وَزُورٗا ٤

5. Waxay dheheen waa warkii dadkii hore oos ka qoray iyadaana loo yeedhiyaa aroor iyo galabba.

وَقَالُوٓاْ أَسَٰطِيرُ ٱلۡأَوَّلِينَ ٱكۡتَتَبَهَا فَهِيَ تُمۡلَىٰ عَلَيۡهِ بُكۡرَةٗ وَأَصِيلٗا ٥

6. Waxaad dhahdaa waxaa soo dejiyey Allaha og waxa ku qarsoon samooyinka iyo dhulka waana dambi dhaafe naxariista.

قُلْ أَنزَلَهُ ٱلَّذِى يَعْلَمُ ٱلسِّرَّ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿٦﴾

Waxaa ammaan mudan Allaha ku soo dejiyey quraanka kala bixiyey xaqa iyo baadilka addoonkiisii Muxamed ahaa, waana wax Alle ku tilmaamo dadka waxa u wayn, si uu caalamka ugu digo dhammaantii, waxayna ku tusin caalaminnimada diinta islaamka, xukunkana Alle ayaa iska leh, ilmo iyo shariigna ma leh, wax walbana isagaa abuuray, cid wax abuuri karta oo Alle ka soo hadhayna ma jirto, ama hanta dhib, nacfi, geeri, nolol, iyo soo bixin midna. Quraankuna waa dhab sugan oo Alle soo dejiyey, wax Nabigu la imaan karana ma aha, ciddii warkaas sheegtana waa mid beenalay ah ee halla yimaadeen wax la mid ah intay isu tagaan, dhabtuna waa inay beenaalayaal caqli daran yihiin, warkooduna wax u dhimi maayo xaqnimada quraanka, sharaftiisa iyo caalaminnimadiisa, siduu Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) u yidhi: waxaa lay diray dadka dhammaantiis. Saas darteed waa inay ku eegaan il xaq ah. **[Al-Furqaan: 1-6].**

7. Waxay dheheen gaaladii muxuu leeyahay rasuulkani oos u cuni cunto una socon suuqa, maa loo soo dejiyo malag oo ahaado mid la diga.

وَقَالُوا۟ مَالِ هَٰذَا ٱلرَّسُولِ يَأْكُلُ ٱلطَّعَامَ وَيَمْشِى فِى ٱلْأَسْوَاقِ ۙ لَوْلَآ أُنزِلَ إِلَيْهِ مَلَكٌ فَيَكُونَ مَعَهُۥ نَذِيرًا ﴿٧﴾

8. Ama maa loo tuuro (dejiyo) kansi ama u ahaato beer uu wax ka cuno xaggeeda, waxayna dheheen daalimiintu ma raacaysaan waxaan nin sixran ahayn.

أَوْ يُلْقَىٰٓ إِلَيْهِ كَنزٌ أَوْ تَكُونُ لَهُۥ جَنَّةٌ يَأْكُلُ مِنْهَا ۚ وَقَالَ ٱلظَّٰلِمُونَ إِن تَتَّبِعُونَ إِلَّا رَجُلًا مَّسْحُورًا ﴿٨﴾

9. Bal day siday kuugu yeeleen tusaale oy u dhumeen una karin (qaadidda) jidka (xaqa).

ٱنظُرْ كَيْفَ ضَرَبُوا۟ لَكَ ٱلْأَمْثَالَ فَضَلُّوا۟ فَلَا يَسْتَطِيعُونَ سَبِيلًا ﴿٩﴾

10. Waxaa khayr badan Allaha hadduu doono kuu yeeli wax ka khayr roon taas, jannooyinna (kuu yeeli) oy socoto dhexdeeda wabiyaal kuuna yeeli daaro (adduunkan).

تَبَارَكَ ٱلَّذِىٓ إِن شَآءَ جَعَلَ لَكَ خَيْرًا مِّن ذَٰلِكَ جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ وَيَجْعَل لَّكَ قُصُورًا ﴿١٠﴾

11. Waxayse beeniyeen saacadda (qiyaame) waxaanna u darabnay ciddii beenisa saacadda naarta saciira.

بَلْ كَذَّبُوا۟ بِٱلسَّاعَةِ ۖ وَأَعْتَدْنَا لِمَن كَذَّبَ بِٱلسَّاعَةِ سَعِيرًا ﴿١١﴾

12. Markay ka aragto meel fog waxay ka maqlaan cadho iyo guux.

إِذَا رَأَتْهُم مِّن مَّكَانٍۭ بَعِيدٍ سَمِعُوا۟ لَهَا تَغَيُّظًا وَزَفِيرًا ﴿١٢﴾

13. Marka lagu tuuro dhexdeeda meel cidhiidhi ah iyagoo isku xidhan waxay u yeedhaan halaag, iyo (khasaare).

وَإِذَآ أُلْقُوا۟ مِنْهَا مَكَانًا ضَيِّقًا مُّقَرَّنِينَ دَعَوْا۟ هُنَالِكَ ثُبُورًا ﴿١٣﴾

14. (Waxaana la dhihi) how yeedhannina maanta halaag kaliya ee u yeedha halaag badan.

لَّا تَدْعُوا۟ ٱلْيَوْمَ ثُبُورًا وَٰحِدًا وَٱدْعُوا۟ ثُبُورًا كَثِيرًا ﴿١٤﴾

Gaalada iyo xaq diidayaashu si xun bay wax u qiyaasaan una qiimeeyaan, waxaana ka mid ah inay sheegeen in Nabigu wax cuni, oo suuqa socon, iyo maxaa malag loola soo diri waayey, ama xoolo badan loo siin waayey, taasina waxay ku tusin inay il xoola jacayl ku dayi wax walba, maxaase xoolo qiima leeyihiin haddaan xaqa loogu gargaarin, ama lagu bixin, waase karaa Alle inuu siiyo Nabiga wax ka wanaagsan waxaas, wuxuuna siiyey, nabinnimo, quraan uu ku soo dejiyey, iyo wanaag aakhiro, maxayse gaalo fali markay la kulmaan naar daran oo guuxi, waa uun calaacal iyo oohin, waxaana Ibnu Cabbaas ka sugnaatay in qof loo jiidi naarta oy u soo ciyi sida baqal shaciir loo soo fidiyey, holac iyo kulaylna la qaylinaysa, isagoon jirin ruuxaan cabsanayn. **[Al-Furqaan: 7-14].**

15. Waxaad dhahdaa ma taasaa khayr roon mise jannada waaridda ee ah middii loo yaboohay kuwa dhawrsada, waxayna u ahaatay kuwaas (dhawrsada) abaal marin iyo noqosho.

قُلْ أَذَٰلِكَ خَيْرٌ أَمْ جَنَّةُ ٱلْخُلْدِ ٱلَّتِى وُعِدَ ٱلْمُتَّقُونَ ۚ كَانَتْ لَهُمْ جَزَآءً وَمَصِيرًا ﴿١٥﴾

16. Waxayna ka helayaan dhexdeeda waxay doonaan wayna ku waari, arrintaasuna

لَّهُمْ فِيهَا مَا يَشَآءُونَ خَٰلِدِينَ ۚ كَانَ عَلَىٰ رَبِّكَ وَعْدًا مَّسْـُٔولًا ﴿١٦﴾

waa yabooh uu isa saaray Allehaa oo sugan.

17. Xusuusta maalintaan kulminayno gaalada iyo waxay caabudi oo Alle ka soo hadhay oos ku dhihi ma idinkaa dhumiyey addoommadaydaas, mise iyagaa ka dhumay jidka.

وَيَوْمَ يَحْشُرُهُمْ وَمَا يَعْبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ فَيَقُولُ ءَأَنتُمْ أَضْلَلْتُمْ عِبَادِى هَـٰٓؤُلَآءِ أَمْ هُمْ ضَلُّوا۟ ٱلسَّبِيلَ ﴿١٧﴾

18. Waxayna odhan waad nasahan tahay naguma habboona inaan yeelanno adi ka sokow awliyo (gargaare), waadse u raaxaysay iyaga iyo aabayaalkood intay ka halmaamaan waxyiga, waxayna noqdeen kuwa halaagsamay.

قَالُوا۟ سُبْحَـٰنَكَ مَا كَانَ يَنۢبَغِى لَنَآ أَن نَّتَّخِذَ مِن دُونِكَ مِنْ أَوْلِيَآءَ وَلَـٰكِن مَّتَّعْتَهُمْ وَءَابَآءَهُمْ حَتَّىٰ نَسُوا۟ ٱلذِّكْرَ وَكَانُوا۟ قَوْمًۢا بُورًا ﴿١٨﴾

19. Way idinku beeniyeen waxaad sheegaysaan mana kartaan furasho iyo gargaar midna, ciddii wax dulmida oo idinka mid ah waxaannu dhadhansiin cadaab wayn.

فَقَدْ كَذَّبُوكُم بِمَا تَقُولُونَ فَمَا تَسْتَطِيعُونَ صَرْفًا وَلَا نَصْرًا ۚ وَمَن يَظْلِم مِّنكُمْ نُذِقْهُ عَذَابًا كَبِيرًا ﴿١٩﴾

Ma sinna wanaagga Alle u darbay mu'miniinta, iyo ciqaabta gaalada, kuwaasoo ay isdiidi waxay caabudi jireen Alle ka sokow, taasina waxay ku tusin in saaxiibnimo iyo isku xidhnaan kasta oon xaqa ahayn ay u dambayn kala tag iyo colnimo iyo in cibaado ka soo hadhay tan Alle ay tahay khasaare, iyo wadda kasta oon ahayn midda Alle ee islaamka ah ay tahay dhumid iyo luggooyo. **[Al-Furqaan: 15-19].**

20. Manaan dirin rasuul kaa horreeyey oon cunayn cunnada soconaynna suuqa, waxaanna uga yeellay qaarkiin qaarka kale fidmo (ibtilo) ee ma samraysaan, Rabbigaana waa arke.

وَمَآ أَرْسَلْنَا قَبْلَكَ مِنَ ٱلْمُرْسَلِينَ إِلَّآ إِنَّهُمْ لَيَأْكُلُونَ ٱلطَّعَامَ وَيَمْشُونَ فِى ٱلْأَسْوَاقِ ۗ وَجَعَلْنَا بَعْضَكُمْ لِبَعْضٍ فِتْنَةً أَتَصْبِرُونَ ۗ وَكَانَ رَبُّكَ بَصِيرًا ﴿٢٠﴾

21. Waxay dheheen kuwaan rajaynayn la kulankannaga maxaa naloogu soo dejin waayey malaa'ig, ama maan aragno Rabbigeen, way iskibriyeen (isula waynaadeen) naftooda wayna madax adaygeen madax adayg wayn.

* وَقَالَ ٱلَّذِينَ لَا يَرۡجُونَ لِقَآءَنَا لَوۡلَآ أُنزِلَ عَلَيۡنَا ٱلۡمَلَٰٓئِكَةُ أَوۡ نَرَىٰ رَبَّنَاۗ لَقَدِ ٱسۡتَكۡبَرُواْ فِيٓ أَنفُسِهِمۡ وَعَتَوۡ عُتُوّٗا كَبِيرٗا ٢١

22. Maalintay arki malaa'igta (geerida) ma bishaaraystaan maalintaas dambiilayaashu, waxayna odhan xijaab oodan iyo reebnaan yaa ah (wanaag iyo isla kulan ma jiro).

يَوۡمَ يَرَوۡنَ ٱلۡمَلَٰٓئِكَةَ لَا بُشۡرَىٰ يَوۡمَئِذٖ لِّلۡمُجۡرِمِينَ وَيَقُولُونَ حِجۡرٗا مَّحۡجُورٗا ٢٢

23. Waannu u qasadnay waxay faleen oo camal ah waxaanna ka yeelnay dhalanteed la firdhiyey.

وَقَدِمۡنَآ إِلَىٰ مَا عَمِلُواْ مِنۡ عَمَلٖ فَجَعَلۡنَٰهُ هَبَآءٗ مَّنثُورًا ٢٣

24. Ehelu jannaha yaa maalintaas khayr roon sugnaansho iyo wanaag badan qayluushi (hurdo).

أَصۡحَٰبُ ٱلۡجَنَّةِ يَوۡمَئِذٍ خَيۡرٞ مُّسۡتَقَرّٗا وَأَحۡسَنُ مَقِيلٗا ٢٤

Rasuulladii kama reebnayn inay wax cunaan, suuqana socdaan, dadkana waa laysku ibtileeyey, Alle na waa arkaa, gaalana xaq uma leh inay codsadaan in malaa'ig lagu soo dejiyo, ama codsadaan inay Alle arkaan, taasi waa isla wayni iyo kibir aan meel haysan, maalintay malaa'ig arkaanna bishaaro ma arkaan ee waa balaayo iyo calaacal, calaacalna wanaag aakhiro kuma helaan, illeen rumayn baa u shardi ah, waxaase wanaag iyo khayr ku bishaaraysan maalintaa mu'miniinta, wana kaas kala tagga aan kulan iyo dhawaansho ka dambeyn.

Xadiith qudsi ah wuxuu Alle ku yidhi Nabiga: waan ku imtixaami, kuguna intixaami. (Naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee). **[Al-Furqaan: 20-24].**

25. Xusuuso maalintay samadu la dillaaci daruuraha, lana soo dejin malaa'igta soo dejin.

وَيَوۡمَ تَشَقَّقُ ٱلسَّمَآءُ بِٱلۡغَمَٰمِ وَنُزِّلَ ٱلۡمَلَٰٓئِكَةُ تَنزِيلًا ٢٥

ٱلْمُلْكُ يَوْمَئِذٍ ٱلْحَقُّ لِلرَّحْمَٰنِ ۚ وَكَانَ يَوْمًا عَلَى ٱلْكَٰفِرِينَ عَسِيرًا ﴿٢٦﴾

26. Xukunka maalintaas ee xaqa ah waxaa iska leh Allaha Raxmaana, waana maalin gaalada ku daran.

وَيَوْمَ يَعَضُّ ٱلظَّالِمُ عَلَىٰ يَدَيْهِ يَقُولُ يَٰلَيْتَنِى ٱتَّخَذْتُ مَعَ ٱلرَّسُولِ سَبِيلًا ﴿٢٧﴾

27. Xusuusana maalintuu qaniini daalimku gacantiisa (faraha) isagoo dhihi shalleytee maan yeesho la jirka Rasuulka jid (maan rumeeyo).

يَٰوَيْلَتَىٰ لَيْتَنِى لَمْ أَتَّخِذْ فُلَانًا خَلِيلًا ﴿٢٨﴾

28. Halaag iyo shalleytee maxaan hebel saaxiib uga yeeshay.

لَّقَدْ أَضَلَّنِى عَنِ ٱلذِّكْرِ بَعْدَ إِذْ جَآءَنِى ۗ وَكَانَ ٱلشَّيْطَٰنُ لِلْإِنسَٰنِ خَذُولًا ﴿٢٩﴾

29. Wuxuu iga leexiyey quraanka intuu ii yimid ka dib, shaydaanna dadka wuxuu u yahay dayace (meel xun kaga tage).

وَقَالَ ٱلرَّسُولُ يَٰرَبِّ إِنَّ قَوْمِى ٱتَّخَذُوا۟ هَٰذَا ٱلْقُرْءَانَ مَهْجُورًا ﴿٣٠﴾

30. Wuxuu yidhi Rasuulkuna Allow qoomkaygii waxay ka yeesheen quraankan mid laga tagay (ma maqlaan).

وَكَذَٰلِكَ جَعَلْنَا لِكُلِّ نَبِىٍّ عَدُوًّا مِّنَ ٱلْمُجْرِمِينَ ۗ وَكَفَىٰ بِرَبِّكَ هَادِيًا وَنَصِيرًا ﴿٣١﴾

31. Saasaan ugu yeellay nabi kasta col dambiilayaal ah, Alle na ku filan hanuuniye iyo gargaare.

Sida wax badan sugnaatay maalinta qiyaame waxaa dhici doorsoon iyo waxyaalo waa wayn, xukunka dhabta ahna Alle ayaa leh maalintaas waana maalin ku culus gaalada, oyna qoomammo faraha la qaniini, oyna shallaayi rumayn la'aanta Rasuulka, oyna shallaytoon saaxiibkii xumaa ee xaqa ka leexiyey ey yeesheen, waxaana sugan in shaydaan yahay meel xun joojiyaha dadka. Nabiguna wuxuu u cabtay Alle markay gaaladii beeniyeen kana tageen quraanka waxse ku gaar ah Nabiga ma aha ee nabi kasta wuxuu lahaa col gaala ah, ka tagidda quraankana waa in la beeniyo, oo la diido, amaan lagu dhaqmin oon la raacin, oon la akhriyin, oon la fiir fiirinnin, ama la halmaamo oon loo aabo yeelin, dhammaan waa halaag iyo khasaare.

Aayaduhuna waxay sugi waynida quraanka, xukunka sugan ee Alle, dhibka ku dhici gaalo maalintaas, calaacalka iyo shallaytada gaalada, xumida saaxiibka

xun, shaydaan inuu dadka dhibi, dhibaatada ka tagidda quraanka iyo ku camal la'aantiisa, in gaalo col u tahay xaqa iyo diinta Islaamka, waxaana ku habboon cidda caqliga leh inay wanaagna hor marsataa xumaantana ka dheeraato, quraanka iyo Nabigana si dhab ah u raacdo una rumayso, si ay u liibaanto. **[Al-Furqaan: 25-31].**

وَقَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لَوۡلَا نُزِّلَ عَلَيۡهِ ٱلۡقُرۡءَانُ جُمۡلَةٗ وَٰحِدَةٗۚ كَذَٰلِكَ لِنُثَبِّتَ بِهِۦ فُؤَادَكَۖ وَرَتَّلۡنَٰهُ تَرۡتِيلٗا ٣٢

32. Waxay dheheen kuwii gaaloobay maa lagu soo dejiyo Nabiga quraanka mar kaliya (isagoo dhan); saasaan yeellay, inaan ku sugno qalbigaaga, waana kugu akhriyeynaa akhrin (fiican).

وَلَا يَأۡتُونَكَ بِمَثَلٍ إِلَّا جِئۡنَٰكَ بِٱلۡحَقِّ وَأَحۡسَنَ تَفۡسِيرًا ٣٣

33. Wixii tusaale ah oy kuula yimaadaanna waxaannu kuugula imaan xaq iyo fasiraadda u fiican.

ٱلَّذِينَ يُحۡشَرُونَ عَلَىٰ وُجُوهِهِمۡ إِلَىٰ جَهَنَّمَ أُوْلَٰٓئِكَ شَرّٞ مَّكَانٗا وَأَضَلُّ سَبِيلٗا ٣٤

34. Kuwa lagu soo kulmin wajigooda (naarta) jahannamo kuwaasu waa kuwa u xun meel uguna dhumid badan jid.

وَلَقَدۡ ءَاتَيۡنَا مُوسَى ٱلۡكِتَٰبَ وَجَعَلۡنَا مَعَهُۥٓ أَخَاهُ هَٰرُونَ وَزِيرٗا ٣٥

35. Waxaanna siinnay Nabi Muuse kitaabkii waxaanna ka yeellay la jirkiisa walaalkiis Haaruun wasiir.

فَقُلۡنَا ٱذۡهَبَآ إِلَى ٱلۡقَوۡمِ ٱلَّذِينَ كَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِنَا فَدَمَّرۡنَٰهُمۡ تَدۡمِيرٗا ٣٦

36. Waxaanna nidhi aada qoomkii beeniyey aayaadkannaga waana baabi'innay (halaagnay) baabi'in (halaag).

Waxay sheegeen gaaladii oy quraanka ku ceebiyeen, maxaa loogu soo dejin waayay Nabiga quraanka dhammaantiis mar qudha, taasina waa xujo xun, wuxuuna Alle ugu soo dejiyey quraanka aayad aayad iyo suurad suurad xigmo darteed, sida: sugidda qalbiga Nabiga iyo xoojintiisa, u jawaabidda gaalada, fudaydinta akhriskiisa iyo xifdigiisa, la socodka dhacdada iyo waxyaalaha soo cusboonaan. Gaalana muxuu war u tari, mar hadday gali jahannamo oo u xun meel loo hoydo, Nabi Muuse iyo wuxuu Fircoon kala kulmayna wax badan yuu

quraanku ka warramay. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: quraanka hal mar yaa lagu soo dejiyey samada dhaw habeenka laylatul qadarka ah, markaas kadib loo soo dejiyey labaatan sano, sida aayaddu sheegtay. **[Al-Furqaan: 32-36].**

وَقَوْمَ نُوحٍ لَّمَّا كَذَّبُوا۟ ٱلرُّسُلَ أَغْرَقْنَٰهُمْ وَجَعَلْنَٰهُمْ لِلنَّاسِ ءَايَةً ۖ وَأَعْتَدْنَا لِلظَّٰلِمِينَ عَذَابًا أَلِيمًا ﴿٣٧﴾

37. (Xusuuso) qoomkii Nabi Nuux, markay beeniyeen rasuulladii yaan maansheynay ugana yeellay dadka calaamad, waxaanna u darabnay daalimiinta cadaab daran.

وَعَادًا وَثَمُودَا۟ وَأَصْحَٰبَ ٱلرَّسِّ وَقُرُونًۢا بَيْنَ ذَٰلِكَ كَثِيرًا ﴿٣٨﴾

38. Caadna waan halaagnay iyo Thamuud, iyo Rasi (ceelkii) ehelkiisii, iyo quruumo intaas u dhaxeeyey oo badan.

وَكُلًّا ضَرَبْنَا لَهُ ٱلْأَمْثَٰلَ ۖ وَكُلًّا تَبَّرْنَا تَتْبِيرًا ﴿٣٩﴾

39. Dhammaan waxaan u yeellay tusaale, dhammaanna waan halaagnay halaag.

وَلَقَدْ أَتَوْا۟ عَلَى ٱلْقَرْيَةِ ٱلَّتِىٓ أُمْطِرَتْ مَطَرَ ٱلسَّوْءِ ۚ أَفَلَمْ يَكُونُوا۟ يَرَوْنَهَا ۚ بَلْ كَانُوا۟ لَا يَرْجُونَ نُشُورًا ﴿٤٠﴾

40. Way tageen gaaladu magaaladii lagu soo daadiyey roob xun (dhagax cadaab), miyeyna arkeyn, waxayse ahaayeen kuwaan rajaynayn (ka yaabayn) soo kulmin.

وَإِذَا رَأَوْكَ إِن يَتَّخِذُونَكَ إِلَّا هُزُوًا أَهَٰذَا ٱلَّذِى بَعَثَ ٱللَّهُ رَسُولًا ﴿٤١﴾

41. Hadday ku arkaan gaaladu waxay kaa yeeshaan jees jees, iyagoo (dhihi) ma kanaa kan Alle soo bixiyey isagoo Rasuul ah.

إِن كَادَ لَيُضِلُّنَا عَنْ ءَالِهَتِنَا لَوْلَآ أَن صَبَرْنَا عَلَيْهَا ۚ وَسَوْفَ يَعْلَمُونَ حِينَ يَرَوْنَ ٱلْعَذَابَ مَنْ أَضَلُّ سَبِيلًا ﴿٤٢﴾

42. Wuxuu u dhawaaday inuu naga dhumiyo ilaahyadannada haddaannaan ku samrin (ku adkaysan), waxay ogaadaan markay arkaan cadaabka cidda dhunsan.

Wax badan yuu quraanku ka warramay Nabiyadii hore iyo qoomkoodii, waxaase loo baahan yahay in lagu waano qaato, gaaladii makaadna way ku jees jeesi jireen Nabiga iyagoo diiddan rasuulnimadiisa kuna madax adaygi gaalnimadooda iyo ilaahyadooda baadilka ah.

Taasina waa shaqada xaq diidayaasha ka hor jeedsada xaqa iyo dadkiisa iyagoo dhibi oo ceebeyn, waxaase guusha hela xaqa inta ku socota, day Nabigii iyo asaxaabtiisii. **[Al-Furqaan: 37-42].**

أَرَءَيْتَ مَنِ ٱتَّخَذَ إِلَٰهَهُۥ هَوَىٰهُ أَفَأَنتَ تَكُونُ عَلَيْهِ وَكِيلًا ﴿٤٣﴾

43. Ka warran ruux ka yeeshay ilaahiisa hawadiisa (suu jecel yahay) ma adaa wakiil (ilaaliye) ka noqon.

أَمْ تَحْسَبُ أَنَّ أَكْثَرَهُمْ يَسْمَعُونَ أَوْ يَعْقِلُونَ ۚ إِنْ هُمْ إِلَّا كَٱلْأَنْعَٰمِ بَلْ هُمْ أَضَلُّ سَبِيلًا ﴿٤٤﴾

44. Mise waxaad u malayn in badankood wax maqli ama wax kasi, ma aha waxaan xoolo oo kale ahayn, iyagaabase ka sii dhunsan.

أَلَمْ تَرَ إِلَىٰ رَبِّكَ كَيْفَ مَدَّ ٱلظِّلَّ وَلَوْ شَآءَ لَجَعَلَهُۥ سَاكِنًا ثُمَّ جَعَلْنَا ٱلشَّمْسَ عَلَيْهِ دَلِيلًا ﴿٤٥﴾

45. Miyeydaan ogayn sida Alle u fidiyo hadhka, hadduu doonana wuxuu ka yeeli lahaa mid xasillan (taagan) markaasaan uga yeellay qorraxda korkiisa daliil (xujo).

ثُمَّ قَبَضْنَٰهُ إِلَيْنَا قَبْضًا يَسِيرًا ﴿٤٦﴾

46. Markaasaan u soo qabannaa xaggannaga qabasho yar.

وَهُوَ ٱلَّذِى جَعَلَ لَكُمُ ٱلَّيْلَ لِبَاسًا وَٱلنَّوْمَ سُبَاتًا وَجَعَلَ ٱلنَّهَارَ نُشُورًا ﴿٤٧﴾

47. Alle waa kan idiinka yeelay habeenka astur, hurdadana raaxo, kana yeelay maalinta waqti faafid (iyo dhaqdhaqaaq).

وَهُوَ ٱلَّذِىٓ أَرْسَلَ ٱلرِّيَٰحَ بُشْرًۢا بَيْنَ يَدَىْ رَحْمَتِهِۦ ۚ وَأَنزَلْنَا مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً طَهُورًا ﴿٤٨﴾

48. Alle (sarreeye) waa kan u dira dabaysha bishaaro darteed naxariistiisa (roobka) hortiisa, waxaanna ka soo dejinnay samada biyo wax daahiriya.

لِّنُحْيِۦَ بِهِۦ بَلْدَةً مَّيْتًا وَنُسْقِيَهُۥ مِمَّا خَلَقْنَآ أَنْعَٰمًا وَأَنَاسِىَّ كَثِيرًا ﴿٤٩﴾

49. Inaan ku nooleyno magaalo dhimatay oon kuna waraabinno waxaan abuurray, xoolo iyo dad badan.

وَلَقَدْ صَرَّفْنَٰهُ بَيْنَهُمْ لِيَذَّكَّرُوا۟ فَأَبَىٰٓ أَكْثَرُ ٱلنَّاسِ إِلَّا كُفُورًا ﴿٥٠﴾

50. Waana ku kala duwnay (badinnay) dhexdooda, inay xusuustaan, wuuna diiday dadka badidiis waxaan gaalnimo iyo jasaarnimo ahayn.

Cid dhuntay oo hawadeeda raacday, Nabiga wax kama saarra, illeen waa xoolahoo kalee, tan kale waxaa ka mid ah aayaadka Alle: fidinta hooska, qorraxda, habeenka, maalinta, iyo roobka dhulka nooleeya, hase yeeshee dadka badidiis waxay doorteen gaalnimo, waxyaalahaas la soo sheegayna waxay inoogu yeedhi rumaynta Alle iyo raacidda sharcigiisa, iyo u hoggaansan dhab ah iyo rumayn sugan. **[Al-Furqaan: 43-50].**

وَلَوْ شِئْنَا لَبَعَثْنَا فِى كُلِّ قَرْيَةٍ نَّذِيرًا ﴿٥١﴾

51. Haddaan doonno waxaan ka bixin lahayn magaalo kasta dige (Nabi).

فَلَا تُطِعِ ٱلْكَٰفِرِينَ وَجَٰهِدْهُم بِهِۦ جِهَادًا كَبِيرًا ﴿٥٢﴾

52. Ee ha adeecin gaalada kulana jahaad quraanka jahaad weyn.

* وَهُوَ ٱلَّذِى مَرَجَ ٱلْبَحْرَيْنِ هَٰذَا عَذْبٌ فُرَاتٌ وَهَٰذَا مِلْحٌ أُجَاجٌ وَجَعَلَ بَيْنَهُمَا بَرْزَخًا وَحِجْرًا مَّحْجُورًا ﴿٥٣﴾

53. Alle wuu isku daraa labada badood, kaasi waa macaan daran, kaasna waa khadhaadh daran (afku diido) yeelayna dhexdooda soohdin iyo xaajis awdan.

وَهُوَ ٱلَّذِى خَلَقَ مِنَ ٱلْمَآءِ بَشَرًا فَجَعَلَهُۥ نَسَبًا وَصِهْرًا ۗ وَكَانَ رَبُّكَ قَدِيرًا ﴿٥٤﴾

54. Alle na waa kan ka abuuray biyaha dad kana yeelay qaraabo iyo soddognimo, Rabbigaana wuu karaa (wax kasta).

وَيَعْبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ مَا لَا يَنفَعُهُمْ وَلَا يَضُرُّهُمْ ۗ وَكَانَ ٱلْكَافِرُ عَلَىٰ رَبِّهِۦ ظَهِيرًا ﴿٥٥﴾

55. Waxayna caabudi gaaladu Alle ka sokow waxaan anfacayn dhibayna, gaalna wuxuu ahaaday mid ka soo hor jeeda Allehiis.

56. Maa naan kuu dirin inaad bishaareeye dige ah noqoto mooyee.

وَمَآ أَرۡسَلۡنَٰكَ إِلَّا مُبَشِّرٗا وَنَذِيرٗا ٥٦

57. Waxaad dhahdaa idinkama warsado (xaqa gaadhsiintiisa) ujuuro, ruuxiise dooni inuu ka yeesho Allehiis xaggiisa waddo (khayr ha falo).

قُلۡ مَآ أَسۡـَٔلُكُمۡ عَلَيۡهِ مِنۡ أَجۡرٍ إِلَّا مَن شَآءَ أَن يَتَّخِذَ إِلَىٰ رَبِّهِۦ سَبِيلٗا ٥٧

Ilaahbaa awoodda leh, hadduu doonana wuxuu u diri lahaa magaalo kasta Nabi, waxayse keentay xigmadiisu inuu Nabiga u diro dadkoo dhan, farayna inuusan maqlin warka gaalada kulana jihaado quraanka iyo gaadhsiintiisa xaqa, waana Allaha ahaysiiyey badaha, kana yeelay kuwa kala duwan kalana jooga, biyahana ka abuuray dad, kana yeelay qaraabo iyo raxim, saas darteedna ayna habboonayn in wax lala caabudo Alle, gaalase waxay noqdeen kuwa shaydaan u kaalmaystay ka soo hor jeedka Alle, Nabiguse waa bishaareeye digi, wax ujuuro ahna kama doono gaadhsiinta xaqa. Saciid binu Jubayr wuxuu yidhi: gaal wuxuu noqday u kaalmeeyaha shaydaanka colnimada iyo gaalnimada. Zayd binu Aslama wuxuu yidhi: wuxuu noqday xidhiidhiyaha shaydaanka. **[Al-Furqaan: 51-57].**

58. Talo saaro Allaha nool een dhimanayn una tasbiixso adoo mahdin, Alle ayaana ku filan dambiga addoommadiisa ogaanshihiisa.

وَتَوَكَّلۡ عَلَى ٱلۡحَيِّ ٱلَّذِي لَا يَمُوتُ وَسَبِّحۡ بِحَمۡدِهِۦۚ وَكَفَىٰ بِهِۦ بِذُنُوبِ عِبَادِهِۦ خَبِيرًا ٥٨

59. Waana Allaha ku abuuray samooyinka iyo dhulka iyo waxa u dhexeeya lix maalmood, kana sara maray carshiga (si u cunanta), ee warso cid wax og.

ٱلَّذِي خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضَ وَمَا بَيۡنَهُمَا فِي سِتَّةِ أَيَّامٖ ثُمَّ ٱسۡتَوَىٰ عَلَى ٱلۡعَرۡشِۖ ٱلرَّحۡمَٰنُ فَسۡـَٔلۡ بِهِۦ خَبِيرٗا ٥٩

60. Marka la dhaho u sujuuda (Allaha) Raxmaan ah waxay dhahaan muxuu yahay Raxmaan, ma waxaan u sujuudeynaa waxaad na farayso, wuxuuna u kordhiyey carar.

وَإِذَا قِيلَ لَهُمُ ٱسۡجُدُواْ لِلرَّحۡمَٰنِ قَالُواْ وَمَا ٱلرَّحۡمَٰنُ أَنَسۡجُدُ لِمَا تَأۡمُرُنَا وَزَادَهُمۡ نُفُورَۢا ٦٠

تَبَارَكَ ٱلَّذِى جَعَلَ فِى ٱلسَّمَآءِ بُرُوجًا
وَجَعَلَ فِيهَا سِرَٰجًا وَقَمَرًا مُّنِيرًا ﴿٦١﴾

61. Waxaa khayr badnaaday Allaha yeela samada burjiyo yeelayna dhexdeeda siraaj (qorrax) iyo dayax ifi.

وَهُوَ ٱلَّذِى جَعَلَ ٱلَّيْلَ وَٱلنَّهَارَ خِلْفَةً
لِّمَنْ أَرَادَ أَن يَذَّكَّرَ أَوْ أَرَادَ شُكُورًا ﴿٦٢﴾

62. Alle na waa Ilaaha uga yeelay habeenka iyo maalinta isbaddel ciddii doonta inuu wax xusuusto ama doono inuu mahdiyo.

Wuxuu Alle faray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) dadka kalana waa la mide inuu Alle talo saarto markuu raaco wuxuu Alle faray samayntiisa, illeen talo saarashadu ma aha seexo ama shaqada ka fadhiiso, ee waa in lala yimaado asbaabta intaas ka dibna Alle la talo saarto. Illeen isagaa nool oon dhimanayne, oo awoodda leh, mudanna mahad, waynayn, cibaado iyo baryaba, mana habboona in layska kibriyo sujuuddiisa iyo cibaadadiisa, miyuuna mudannin waxaas Allaha cirka yeelay burjiyo, qorrax iyo dayax, yeelayna habeen iyo dharaar isbadala, oos ku waano qaato ciddii wax xusuusan ama waana qaadan.

Gaaladii qureesheed way diidi jireen magaca Alle, ee Raxmaana, waxayna dhihi jireen: waa maxay Raxmaan? markaasaa Alle ku ceebiyey arrintaas. **[Al-Furqaan: 58-62].**

وَعِبَادُ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلَّذِينَ يَمْشُونَ عَلَى
ٱلْأَرْضِ هَوْنًا وَإِذَا خَاطَبَهُمُ ٱلْجَٰهِلُونَ
قَالُوا۟ سَلَٰمًا ﴿٦٣﴾

63. Addoommada Allaha Raxmaana waa kuwa u socda dhulka xasillooni, markay la hadlaan (af xumeeyaan) jaahilliinna yidhaahda nabadgalyo.

وَٱلَّذِينَ يَبِيتُونَ لِرَبِّهِمْ سُجَّدًا
وَقِيَٰمًا ﴿٦٤﴾

64. Ee ah kuwa ku barya (habeenkii) iyagoo u sujuudi oo u istaagi (cibaado) Alle.

وَٱلَّذِينَ يَقُولُونَ رَبَّنَا ٱصْرِفْ عَنَّا عَذَابَ
جَهَنَّمَ ۖ إِنَّ عَذَابَهَا كَانَ غَرَامًا ﴿٦٥﴾

65. Ee ah kuwa dhihi Ilaahow naga iil cadaabka jahannamo, cadaabkeedu waa joogtee.

إِنَّهَا سَآءَتْ مُسْتَقَرًّا وَمُقَامًا ﴿٦٦﴾

66. Iyaduna waxay u xun tahay ku sugnaansho iyo ku nagaadi.

67. Ee ah kuwa markay wax bixiyaan aan xad gudbin cidhiidhyinna, oo intaas dhexdeeda ku toosnaada.

وَٱلَّذِينَ إِذَآ أَنفَقُوا۟ لَمْ يُسْرِفُوا۟ وَلَمْ يَقْتُرُوا۟ وَكَانَ بَيْنَ ذَٰلِكَ قَوَامًا ﴿٦٧﴾

68. Ee ah kuwaan caabudayn Alle la jirkiisa ilaah kale, oonna dilayn naftuu Alle xarrimay dilkeeda xaq mooyee, oon zinaysanayn, ciddii saas fashana waxay la kulmi (abaalmarinta) dambiga.

وَٱلَّذِينَ لَا يَدْعُونَ مَعَ ٱللَّهِ إِلَٰهًا ءَاخَرَ وَلَا يَقْتُلُونَ ٱلنَّفْسَ ٱلَّتِى حَرَّمَ ٱللَّهُ إِلَّا بِٱلْحَقِّ وَلَا يَزْنُونَ ۚ وَمَن يَفْعَلْ ذَٰلِكَ يَلْقَ أَثَامًا ﴿٦٨﴾

69. Waxaana loo laab laabi cadaabka maalinta qiyaame wuuna ku waari dhexdiisa isagoo dullaysan.

يُضَٰعَفْ لَهُ ٱلْعَذَابُ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ وَيَخْلُدْ فِيهِۦ مُهَانًا ﴿٦٩﴾

70. Ciddii toobad keenta oo rumaysa oo fasha camal fiican mooyee, oo kuwaas waxaa loogu badali xumaantooda wanaag, Alle na waa dambi dhaafe naxariista.

إِلَّا مَن تَابَ وَءَامَنَ وَعَمِلَ عَمَلًا صَٰلِحًا فَأُو۟لَٰٓئِكَ يُبَدِّلُ ٱللَّهُ سَيِّـَٔاتِهِمْ حَسَنَٰتٍ ۗ وَكَانَ ٱللَّهُ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿٧٠﴾

71. Ruuxii toobad keena oo fala wanaag wuxuu u noqon Alle noqosho.

وَمَن تَابَ وَعَمِلَ صَٰلِحًا فَإِنَّهُۥ يَتُوبُ إِلَى ٱللَّهِ مَتَابًا ﴿٧١﴾

Isla wayni islaamku ma oggala, wuxuuna fari in jaahiliinta warkooda layska dhaafo, Alle na la caabudo, lagana magan galo naarta, oon nafaqadana lagu xadgudbin layskuna cidhiidhyin ee la dhexdhexeeysto, gaalnimana layska jiro, iyo dil naf la reebay oo xaq darro, zinana laga fogaado, waxyaalahaasna waa waxa laab laaba cadaabka, ciddiise toobadkeenta Alle wuu ka aqbali, xumaantana wuxuu ugu badali wanaag, tilmaamahaasna waxaa ku sifooba mu'miniinta fiicfiican. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Alle haw shariig yeelina, naf xaq darrana ha dilina, hana zinaysannina, hana xadina. Waxaa sheegay saxaabigii Salamo binu Qays. **[Al-Furqaan: 63-71].**

72. (Kuwa fiican) waa kuwaan furayn been, markay maqlaan hadal xunna mara iyagoo wanaagsan (ka jeedsada).

وَٱلَّذِينَ لَا يَشْهَدُونَ ٱلزُّورَ وَإِذَا مَرُّوا۟ بِٱللَّغْوِ مَرُّوا۟ كِرَامًا ﴿٧٢﴾

73. Waana kuwa marka lagu waaniyo aayaadka Rabbigood aan dhicin (ahaanninna) dhago iyo indho la'aan (ee wax ku dheefa).

وَٱلَّذِينَ إِذَا ذُكِّرُواْ بِـَٔايَـٰتِ رَبِّهِمْ لَمْ يَخِرُّواْ عَلَيْهَا صُمًّا وَعُمْيَانًا ﴿٧٣﴾

74. Waana kuwa dhihi Allow naga sii (naga tusi) haweenkannaga iyo caruurtannada wax ishu ku qabowsato, nagana yeel kuwo ay ku daydaan kuwa dhawrsada.

وَٱلَّذِينَ يَقُولُونَ رَبَّنَا هَبْ لَنَا مِنْ أَزْوَٰجِنَا وَذُرِّيَّـٰتِنَا قُرَّةَ أَعْيُنٍ وَٱجْعَلْنَا لِلْمُتَّقِينَ إِمَامًا ﴿٧٤﴾

75. Kuwaas waxaa lagu abaal marin fooqa (janno) samirkoodii dartiis waxayna kula kulmi dhexdeeda salaan iyo soo dhawayn.

أُوْلَـٰٓئِكَ يُجْزَوْنَ ٱلْغُرْفَةَ بِمَا صَبَرُواْ وَيُلَقَّوْنَ فِيهَا تَحِيَّةً وَسَلَـٰمًا ﴿٧٥﴾

76. Wayna ku waari dhexdeeda, waxaana u wanaagsan jannada ku sugnaan iyo nagaadiba.

خَـٰلِدِينَ فِيهَا ۚ حَسُنَتْ مُسْتَقَرًّا وَمُقَامًا ﴿٧٦﴾

77. Waxaadna dhahdaa idiinma aabo yeeleen Rabbigey haddaydaan baryeyn (illeen) waad beeniseen (xaqee), wuxuuna ahaan mid idin laasima (ciqaabka) beenintu.

قُلْ مَا يَعْبَؤُاْ بِكُمْ رَبِّى لَوْلَا دُعَآؤُكُمْ ۖ فَقَدْ كَذَّبْتُمْ فَسَوْفَ يَكُونُ لِزَامًا ﴿٧٧﴾

Waxaa ka mid ah tilmaanta addoomaha Alle inay yihiin kuwaan joogsan meel gaalnimo, oon furinna been iyo xumaan, kana jeedsada waxa macno darro, kasa oo fahma aayaadka Alle een garasho la'aan iyo indho la'aan la joogin, waana kuwa ehelkooda wanaagga la jeclaada iyo Alle ka yaabid, illeen haddii kale wax kuuma taraan, kuwaa toosnaan ee Alle warsan inuu ka yeelo imaamyo lagu daydo oo suubban, kuwaas jannaa lagu abaal marin samirkooda dartiis, waxayna la kulmi salaan iyo soo dhawayn, iyo ku sugnaan meel fiican, Alle na ciduu u aaba yeeli ama danayn ma jirto haddayna caabudin ooyan baryin, gaalana hadday xaqa beeniyaan waxaa haleeli ciqaabtiisa. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: maydiinka warramaa ka u wayn dambi saddex goor, waxayna dhaheen: haa, wuxuuna yidhi: gaalnimo, caaqwaalid, iyo hadalka beenta ah iyo maragga beenta ah, wuuna cel celiyey intaan ka dhahno muu aamuso. (Sixiix). **[Al-Furqaan: 72-77].**

Suurat Ash-Shucaraa'

سُورَةُ الشُّعَرَاءِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxay ku tusin mucjisada quraanka sida soo hor martay.

طسٓمٓ ١

2. Taasi waa aayadihii kitaabka cad.

تِلْكَ ءَايَٰتُ ٱلْكِتَٰبِ ٱلْمُبِينِ ٢

3. Waxaadna u dhawdahay Nabiyow inaad halaagto naftaada haddayna rumayn xaqa.

لَعَلَّكَ بَٰخِعٌ نَّفْسَكَ أَلَّا يَكُونُوا۟ مُؤْمِنِينَ ٣

4. Haddaan doonno waxaan kaga soo dejinaynaa korkooda samada aayad oy noqoto luquntoodu miday u khushuucdo.

إِن نَّشَأْ نُنَزِّلْ عَلَيْهِم مِّنَ ٱلسَّمَآءِ ءَايَةً فَظَلَّتْ أَعْنَٰقُهُمْ لَهَا خَٰضِعِينَ ٤

5. Waxkasta oo quraana oo uga yimaadda xagga Allaha Raxmaana, oo soo darriyo (cusboonaada) waxay ahaan kuwo ka jeedsada.

وَمَا يَأْتِيهِم مِّن ذِكْرٍ مِّنَ ٱلرَّحْمَٰنِ مُحْدَثٍ إِلَّا كَانُوا۟ عَنْهُ مُعْرِضِينَ ٥

6. Waxayna beeniyeen (xaqa) waxaase u imaan warka waxay ku jees jeesayeen.

فَقَدْ كَذَّبُوا۟ فَسَيَأْتِيهِمْ أَنۢبَٰٓؤُا۟ مَا كَانُوا۟ بِهِۦ يَسْتَهْزِءُونَ ٦

7. Miyeyna arkayn dhulka inaan ka soo bixinno nooc kasta oo fiican.

أَوَلَمْ يَرَوْا۟ إِلَى ٱلْأَرْضِ كَمْ أَنۢبَتْنَا فِيهَا مِن كُلِّ زَوْجٍ كَرِيمٍ ٧

8. Taasna waxaa ku sugan aayad badankooduna ma aha mid rumeyn (xaqa).

إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَةً ۖ وَمَا كَانَ أَكْثَرُهُم مُّؤْمِنِينَ ٨

9. Rabbigaana waa adkaade naxariista.

وَإِنَّ رَبَّكَ لَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلرَّحِيمُ ﴿٩﴾

Aayaduhu waxay xoojin oo calool adkayn Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeele) iyo in Alle awoodda leeyahay oo waxuu doono ku soo dejin karo, waxayse ka caada yeesheen gaaladu inay xaqa beeniyaan, wayse ogaan cidhibta arrintaas. Ciddiise waano qaadan ha daydo dhulka iyo waxa Alle ka soo bixiyo oo ah wax lagu waano qaato. Shacbi wuxuu yidhi: dadka waxaa laga abuuray dhulka ciddii jannada gashana waa mid fiican, kii naarta galana waa mid xun. **[Ash-Shucaraa': 1-9].**

10. (Xusuuso) markuu ugu yeedhay Allehaa (Nabi) Muuse inuu aado qoomka daalimiinta ah.

وَإِذْ نَادَىٰ رَبُّكَ مُوسَىٰٓ أَنِ ٱئْتِ ٱلْقَوْمَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿١٠﴾

11. Qoomka fircoon, may dhawrsadaan.

قَوْمَ فِرْعَوْنَ ۚ أَلَا يَتَّقُونَ ﴿١١﴾

12. Wuxuu yidhi (Nabi) Muuse Allow waxaan ka cabsan inay i beeniyaan.

قَالَ رَبِّ إِنِّيٓ أَخَافُ أَن يُكَذِّبُونِ ﴿١٢﴾

13. Waa ay cidhiidhyantaa laabtaydu siina daysmi maayo carrabkaygu ee dir la jirkayga Haaruun.

وَيَضِيقُ صَدْرِى وَلَا يَنطَلِقُ لِسَانِى فَأَرْسِلْ إِلَىٰ هَٰرُونَ ﴿١٣﴾

14. Waxayna igu leeyihiin dambi (godob) waxaana ka cabsan inay i dilaan.

وَلَهُمْ عَلَىَّ ذَنۢبٌ فَأَخَافُ أَن يَقْتُلُونِ ﴿١٤﴾

15. Wuxuu yidhi Ilaahay saas ma aha ee la aada aayaadkannaga, annagaa idinla jirra maqlina.

قَالَ كَلَّا ۖ فَٱذْهَبَا بِـَٔايَٰتِنَآ ۖ إِنَّا مَعَكُم مُّسْتَمِعُونَ ﴿١٥﴾

16. Ee u taga Fircoon una dhaha annagu waxaan nahay Rasuullada Rabbiga caalamka.

فَأْتِيَا فِرْعَوْنَ فَقُولَآ إِنَّا رَسُولُ رَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿١٦﴾

17. Ee dir «u oggolow» banii israa'iil la jirkannaga.

أَنْ أَرْسِلْ مَعَنَا بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ﴿١٧﴾

18. Wuxuu yidhi (Fircoon) miyaannaan kugu barbaarinnin dhexdannada adoo yar oodan

قَالَ أَلَمْ نُرَبِّكَ فِينَا وَلِيدًا وَلَبِثْتَ فِينَا مِنْ عُمُرِكَ سِنِينَ ﴿١٨﴾

ku nagaannin dhexdannada cimrigaaga sanooyin.

19. Ood fashay arrintaad fashay adoo diiddan (sama falkii).

وَفَعَلْتَ فَعْلَتَكَ ٱلَّتِى فَعَلْتَ وَأَنتَ مِنَ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿١٩﴾

20. Wuxuu yidhi (Nabi) Muuse: waan falay anoon wax kasayn.

قَالَ فَعَلْتُهَآ إِذًا وَأَنَا۠ مِنَ ٱلضَّآلِّينَ ﴿٢٠﴾

21. Waana idinka cararay markaan idinka cabsaday markaasuu Alle i siiyey Nabinnimo, igana yeelay kuwa la diray (Rasuul).

فَفَرَرْتُ مِنكُمْ لَمَّا خِفْتُكُمْ فَوَهَبَ لِى رَبِّى حُكْمًا وَجَعَلَنِى مِنَ ٱلْمُرْسَلِينَ ﴿٢١﴾

22. Taasise ma nicma aad igu mannaysan baa adigoo addoonsaday banii israaa'iil.

وَتِلْكَ نِعْمَةٌ تَمُنُّهَا عَلَىَّ أَنْ عَبَّدتَّ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ﴿٢٢﴾

Wax badan yuu Alle ka warramay siduu u diray Nabi Muuse iyo siduu u beeniyey Fircoon iyo wixii dhex maray, iyo say u doodeen, dood xaq iyo run ah oo Nabi Muuse iyo dood kibir iyo been ah oo Fircoon, waxaase hadhay xaqii, waxaana tegay oo halaagsamay xumaantii iyo isla waynidii, waana sidaa waligeed xaqa iyo baadilka iyo kibirka. **[Ash-Shucaraa': 10-22].**

23. Fircoon wuxuu yidhi waa maxay Rabbiga caalamka.

قَالَ فِرْعَوْنُ وَمَا رَبُّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٢٣﴾

24. Wuxuu yidhi (Nabi) Muuse waa Rabbiga samooyinka iyo waxa u dhaxeeya haddaad wax yaqiinsanaysaan (ruumaynaysaan).

قَالَ رَبُّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَآ ۖ إِن كُنتُم مُّوقِنِينَ ﴿٢٤﴾

25. Wuxuu ku yidhi (Fircoon) kuwii gaararkiisa ahaa war ma maqlaysaan.

قَالَ لِمَنْ حَوْلَهُۥٓ أَلَا تَسْتَمِعُونَ ﴿٢٥﴾

26. Wuxuu yidhi Nabi Muuse waa Allihiin iyo Rabbiga aabayaalkiinnii hore.

قَالَ رَبُّكُمْ وَرَبُّ ءَابَآئِكُمُ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿٢٦﴾

27. Wuxuu yidhi Fircoon Rasuulkiinna laydiin soo diray waa waalan yahay.

قَالَ إِنَّ رَسُولَكُمُ ٱلَّذِىٓ أُرْسِلَ إِلَيْكُمْ لَمَجْنُونٌ ﴿٢٧﴾

قَالَ رَبُّ ٱلْمَشْرِقِ وَٱلْمَغْرِبِ وَمَا بَيْنَهُمَآ ۖ إِن كُنتُمْ تَعْقِلُونَ ﴿٢٨﴾

28. Wuxuu yidhi Nabi Muuse waa Rabbiga bari iyo galbeed iyo waxa u dhaxeeya haddaad wax kasaysaan.

قَالَ لَئِنِ ٱتَّخَذْتَ إِلَٰهًا غَيْرِى لَأَجْعَلَنَّكَ مِنَ ٱلْمَسْجُونِينَ ﴿٢٩﴾

29. Wuxuu yidhi fircoon haddaad yeelato ilaah iga soo hadhay waxaan kaa yeeli kuwa xabbisan.

قَالَ أَوَلَوْ جِئْتُكَ بِشَىْءٍ مُّبِينٍ ﴿٣٠﴾

30. Wuxuu yidhi Nabi Muuse haddaan kuula imaaddo wax cadna.

قَالَ فَأْتِ بِهِۦٓ إِن كُنتَ مِنَ ٱلصَّٰدِقِينَ ﴿٣١﴾

31. Wuxuu yidhi fircoon la imow haddaad run sheegi.

Wali waxaa socda dooddii xaqa iyo baadilka, xaquu u yeedhi Nabi Muuse amar Alle iyo baadil uu hoggaamin Fircoon waswaasin shaydaan iyo kibir iyo isla waynaan aan wax ka jirin, sidaasayna had iyo jeer u loollamaan xaqa iyo baadilku, waxaase la rabaa mu'minka dhabta ah inuu ku sugnaado xaqa uguna yeedho dadka si cad oon qallooc, caytan iyo af lagaaddo lahayn, bal day hadalka Nabi Muuse iyo Fircoon hadalkiisa, waa waano, is farid iyo run Nabi Muuse, iyo af xumo iyo caytan Fircoon faafin, taasina waxay wax tusaalayn kuwa xaqa fari oo wanaagga u yeedhi. **[Ash-Shucaraa': 23-31].**

فَأَلْقَىٰ عَصَاهُ فَإِذَا هِىَ ثُعْبَانٌ مُّبِينٌ ﴿٣٢﴾

32. Markaasuu tuuray Nabi Muuse ushiisii waxayna noqotay mas muuqda.

وَنَزَعَ يَدَهُۥ فَإِذَا هِىَ بَيْضَآءُ لِلنَّٰظِرِينَ ﴿٣٣﴾

33. Wuxuuna siibay gacantiisa waxayna ahaatay mid u cad dadka dayi.

قَالَ لِلْمَلَإِ حَوْلَهُۥٓ إِنَّ هَٰذَا لَسَٰحِرٌ عَلِيمٌ ﴿٣٤﴾

34. Wuxuu ku yidhi (Fircoon) kuwii gaararkiisa ahaa kani waa sixirre xeel dheer.

يُرِيدُ أَن يُخْرِجَكُم مِّنْ أَرْضِكُم بِسِحْرِهِۦ فَمَاذَا تَأْمُرُونَ ﴿٣٥﴾

35. Doonina inuu idinkaga bixiyo dhulkiinna sixirkiisa ee maxaad faraysaan.

36. Waxay dheheen dib u dhig isaga iyo walaalkiis (xaalkooda) una dir magaalooyinka kuwo soo kulmiya.

قَالُوٓاْ أَرۡجِهۡ وَأَخَاهُ وَٱبۡعَثۡ فِي ٱلۡمَدَآئِنِ حَٰشِرِينَ ٣٦

37. Ha kuu keeneen sixirre kasta oo xeel dheer.

يَأۡتُوكَ بِكُلِّ سَحَّارٍ عَلِيمٖ ٣٧

38. Waxaana loo kulmiyey saaxiriintiii imaatin maalin la yaqaan.

فَجُمِعَ ٱلسَّحَرَةُ لِمِيقَٰتِ يَوۡمٖ مَّعۡلُومٖ ٣٨

39. Waxaana loo yidhi dadkii ma kulmaysaan.

وَقِيلَ لِلنَّاسِ هَلۡ أَنتُم مُّجۡتَمِعُونَ ٣٩

40. Inaan raacno saaxiriinta hadday adkaadaan.

لَعَلَّنَا نَتَّبِعُ ٱلسَّحَرَةَ إِن كَانُواْ هُمُ ٱلۡغَٰلِبِينَ ٤٠

Nabi Muuse wuxuu Alle ku xoojiyey mucjisado, sida usha, gacanta nuuri, iyo kuwo kale, fircoonse wuu ka madax adaygay, oo diiday xaqa, isagoo u tusin qoomkiisii in (Nabi) Muuse xumaan iyo dhulkoos ka bixiyo wado, isuna ekeysiiyey inuu ku xidhan yahay hadalkooda iyo ra'yigooda, oyna wax faraan si uu ugu tallaabsado maslaxadooda, iyaguna waxay kula arrimiyeen in xaalka dib loo dhigo, dadna loo diro magaalooyinka si ay u soo kulmiyaan kuwa sixirka aad u yaqaan, waana la soo kulmiyey saaxiriintii, dadkiina way soo kulmeen si ay u raacaan saaxiriinta hadday adkaadaan. Maxaase dhacay, waa waxay ka warrami aayadaha soo socda, kana warrameen kuwo badan. Fircoon warkiisu waa badan yahay, waxaase la yaab leh inuu noqdo mid xaqa ilaalin oo maslaxadda dadkiisa dhowri, kuna xidhan hadalkooda iyo amarkooda, dhabse ma aha taasi. **[Ash-Shucaraa': 32-40].**

41. Markay yimaaddeen saaxiriintii waxay ku dheheen Fircoon ujuuro ma leennahay haddaan adkaanno.

فَلَمَّا جَآءَ ٱلسَّحَرَةُ قَالُواْ لِفِرۡعَوۡنَ أَئِنَّ لَنَا لَأَجۡرًا إِن كُنَّا نَحۡنُ ٱلۡغَٰلِبِينَ ٤١

42. Wuxuuna yidhi haa waxaadna noqonaysaan kuwa ii dhow.

قَالَ نَعَمۡ وَإِنَّكُمۡ إِذٗا لَّمِنَ ٱلۡمُقَرَّبِينَ ٤٢

43. Wuxuu ku yidhi (Nabi) Muuse tuura waxaad tuuraysaan.

قَالَ لَهُم مُّوسَىٰٓ أَلۡقُواْ مَآ أَنتُم مُّلۡقُونَ ٤٣

44. Waxayna tuureen xadhkahoodii iyo ulahoodii waxayna dheheen sharafta Fircoon yaan ku dhaarannaye annagaa adkaan.

فَأَلْقَوْا۟ حِبَالَهُمْ وَعِصِيَّهُمْ وَقَالُوا۟ بِعِزَّةِ فِرْعَوْنَ إِنَّا لَنَحْنُ ٱلْغَٰلِبُونَ ﴿٤٤﴾

45. Markaasuu tuuray (Nabi) Muuse ushiisii waxayna ahaatay mid gurata waxay dhoodhoobeen.

فَأَلْقَىٰ مُوسَىٰ عَصَاهُ فَإِذَا هِىَ تَلْقَفُ مَا يَأْفِكُونَ ﴿٤٥﴾

46. Waxaana la riday saaxirintii sujuud darteed.

فَأُلْقِىَ ٱلسَّحَرَةُ سَٰجِدِينَ ﴿٤٦﴾

47. Waxayna dheheen waxaan rumaynay Rabbiga caalamka.

قَالُوٓا۟ ءَامَنَّا بِرَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٤٧﴾

48. Rabbiga (Nabi) Muuse iyo (Nabi) Haaruun.

رَبِّ مُوسَىٰ وَهَٰرُونَ ﴿٤٨﴾

Saaxiriintii markay ka yimmaaddeen Masar jahooyinkeeda iyagoo ah kuwo ugu sixir badan, ahna dad badan yey waydiisteen fircoon abaal gud hadday adkaadaan, wuuna u ballan qaaday inuu abaal mariyo, wuxuuna ugu deeqay inay noqdaan kuwa u dhow ee agtiisa jooga, wayna tuureen waxay soo dhoodhoobeen oo sixir ah, iyagoo ku dhaartay Fircoon inay adkaan, wayse beenowday dhaartii, waxaana cuntay waxay wateen ushii Nabi Muuse, markaasay garteen inay xumaan ku socdeen, wayna toobad keeneen, iyagoo rumeeyey Alle iyo xaqay la yimaadeen Nabi Muuse iyo Nabi Haaruun. Saasuuna u sarreeyey xaqii una buray sixirkoodii loogana adkaaday Fircoon iyo colkiisii. Xujada cad ee xaqaba way jabisaa xumaaanta iyo baadilka had iyo jeer. Ka dhawrsasho iyo sharaf iyo ku dhaarashana waynaa muta Alle sarreeye. **[Ash-Shucaraa': 41-48].**

49. Wuxuu yidhi Fircoon miyaad rumeyseen Muuse ka hor idankayga, isagu waa kan idiinku wayn ee idin baray sixirka waadse ogaan doontaan, waxaana u goyn gacmahiinna iyo lugahiinna isdhaaf, waana idin wadhi dhammaantiin.

قَالَ ءَامَنتُمْ لَهُۥ قَبْلَ أَنْ ءَاذَنَ لَكُمْ ۖ إِنَّهُۥ لَكَبِيرُكُمُ ٱلَّذِى عَلَّمَكُمُ ٱلسِّحْرَ ۖ فَلَسَوْفَ تَعْلَمُونَ ۚ لَأُقَطِّعَنَّ أَيْدِيَكُمْ وَأَرْجُلَكُم مِّنْ خِلَٰفٍ وَلَأُصَلِّبَنَّكُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٤٩﴾

50. Waxayna dhaheen dhib ma leh annagu xagga Rabbigeen ayaan u noqonaynaa.

قَالُوا۟ لَا ضَيْرَ ۖ إِنَّآ إِلَىٰ رَبِّنَا مُنقَلِبُونَ ﴿٥٠﴾

إِنَّا نَطْمَعُ أَن يَغْفِرَ لَنَا رَبُّنَا خَطَٰيَٰنَآ أَن كُنَّآ أَوَّلَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٥١﴾

51. Waxaanna dalbaynaa (damcaynaa) inuu noo dhaafo Rabbigeen gafafkannaga inaan noqonnay kuwii ugu hor rumeeyey (xaqa).

* وَأَوْحَيْنَآ إِلَىٰ مُوسَىٰٓ أَنْ أَسْرِ بِعِبَادِىٓ إِنَّكُم مُّتَّبَعُونَ ﴿٥٢﴾

52. Waxaan u waxyoonnay Nabi Muuse guuri addoommadayda waa laydin raaciye.

فَأَرْسَلَ فِرْعَوْنُ فِى ٱلْمَدَآئِنِ حَٰشِرِينَ ﴿٥٣﴾

53. Markaasuu u diray fircoon magaalooyinka kuwo soo kulmiya.

إِنَّ هَٰٓؤُلَآءِ لَشِرْذِمَةٌ قَلِيلُونَ ﴿٥٤﴾

54. Isagoo dhihi kuwaasu «banii israa'iil» waa koox yar.

وَإِنَّهُمْ لَنَا لَغَآئِظُونَ ﴿٥٥﴾

55. Wayna na cadho galiyeen.

وَإِنَّا لَجَمِيعٌ حَٰذِرُونَ ﴿٥٦﴾

56. Waxaanna nahay kuwo had iyo jeer digtoon.

فَأَخْرَجْنَٰهُم مِّن جَنَّٰتٍ وَعُيُونٍ ﴿٥٧﴾

57. Waxaanna ka bixinnay beero iyo (biyo) ilo.

وَكُنُوزٍ وَمَقَامٍ كَرِيمٍ ﴿٥٨﴾

58. Iyo kanziyo iyo nagaadi fiican.

كَذَٰلِكَ ۖ وَأَوْرَثْنَٰهَا بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ﴿٥٩﴾

59. Waxaanna dhaxalsiinnay banii israa'iil.

Xaqi baa caddaaday, Fircoonse waa inuu qariyo jabkiisa, wuxuuna isku rogay colkuu soo doortay kuna tuhmay inay shirqoolayaan, oy Muuse wax la hayeen, wuuna hadiday inuu layn, waxbase kama tarin, illeen xaqay rumeeyeene, Alle na wuxuu faray Nabi Muuse inuu la guuro inta rumaysay, Fircoonna waa raacay isagoo soo kulmiyey colkiisii, marna hadidi Muuse iyo intii rumaysay, mana faa'iidin, waxayse ku dhammaatay in la halaago siday aayaduhu sheegi. **[Ash-Shucaraa': 49-59].**

فَأَتْبَعُوهُم مُّشْرِقِينَ ﴿٦٠﴾

60. Markaasay raaceen (ka daba duuleen) qorrax soo bixii.

فَلَمَّا تَرَٰٓءَا ٱلْجَمْعَانِ قَالَ أَصْحَٰبُ مُوسَىٰٓ إِنَّا لَمُدْرَكُونَ ﴿٦١﴾

61. Markay isu muuqdeen labadii kooxood waxay dheheen asaxaabtii Nabi Muuse innaga waa layna haleelay.

62. Wuxuuna yidhi (Nabi) Muuse: saas ma aha ee Rabbigaybaa ila jira wuuna i toosin.

قَالَ كَلَّآ ۖ إِنَّ مَعِيَ رَبِّي سَيَهْدِينِ ﴿٦٢﴾

63. Waxaanna u waxyoonnay (Nabi) Muuse ku garaac ushaada badda wayna kala jeexantay baddii wuxuuna noqday jeex kasta buur wayn oo kale.

فَأَوْحَيْنَآ إِلَىٰ مُوسَىٰٓ أَنِ ٱضْرِب بِّعَصَاكَ ٱلْبَحْرَ ۖ فَٱنفَلَقَ فَكَانَ كُلُّ فِرْقٍ كَٱلطَّوْدِ ٱلْعَظِيمِ ﴿٦٣﴾

64. Waanna u soo dhawaynay halkaas kuwii kale (colkii fircoon).

وَأَزْلَفْنَا ثَمَّ ٱلْـَٔاخَرِينَ ﴿٦٤﴾

65. Waxaanna korinnay (Nabi) Muuse iyo intii la jirtay dhammaan.

وَأَنجَيْنَا مُوسَىٰ وَمَن مَّعَهُۥٓ أَجْمَعِينَ ﴿٦٥﴾

66. Ka dibna waxaan maanshaynay kuwii kale.

ثُمَّ أَغْرَقْنَا ٱلْـَٔاخَرِينَ ﴿٦٦﴾

67. Arrintaasna waxaa ku sugan aayad mana aha badankood kuwo rumeyn.

إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَآيَةً ۖ وَمَا كَانَ أَكْثَرُهُم مُّؤْمِنِينَ ﴿٦٧﴾

68. Rabbigaana waa adkaade naxariista.

وَإِنَّ رَبَّكَ لَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلرَّحِيمُ ﴿٦٨﴾

Waxay sheegeen fasirayaashu in Fircoon la baxay col wayn oo ka kooban madaxdii iyo askartii. Aayaduhuna waxay noo sheegeen in markay isku dhawaadeen labadii col oy ku calaa caleen dad ka mid ah qoomkii Nabi Muuse in la haleelay, wuxuuse ku kalsoonaa Ilaahiis inuu toosin, wuxuuna u waxyooday inuu badda garaaco, oyna kala jeexantay, Fircoon iyo colkiisina lagu soo dhaweeyey, lana koriyey (Nabi) Muuse iyo intii la jirtay, lana halaagay oo la maansheeyey Fircoon iyo colkiisii, taasina waa calaamad lagu waano qaato. Wuxuu wariyey Ibnu abii Xaatim in markuu Nabi Muuse gaadhay badda ku baryey Alle: Ilaaha ahaa wax kasta hortiis oo ahaysiiyey wax kastoow, oo ahaan wax kasta gadaashiisow, noo yeel faraj. Markaasuu Alle u waxyooday garaac badda, wana taas ku xidhnaanta Alle iyo rumayntiisu. **[Ash-Shucaraa': 60-68].**

69. Ku akhri korkooda warkii Nabi Ibraahim.

وَٱتْلُ عَلَيْهِمْ نَبَأَ إِبْرَٰهِيمَ ﴿٦٩﴾

70. Markuu ku yidhi aabihiis iyo qoomkiisii maxaad caabudaysaan.

إِذْ قَالَ لِأَبِيهِ وَقَوْمِهِۦ مَا تَعْبُدُونَ ﴿٧٠﴾

71. Waxay dheheen waxaannu caabudi sanamyo oonu ahaan kuwo ku nagaada.

قَالُواْ نَعۡبُدُ أَصۡنَامٗا فَنَظَلُّ لَهَا عَٰكِفِينَ ٧١

72. Wuxuu yidhi (Nabi Ibraahim) maydin maqlayaan markaad baryeysaan.

قَالَ هَلۡ يَسۡمَعُونَكُمۡ إِذۡ تَدۡعُونَ ٧٢

73. Mase idin anfaci ama idin dhibi.

أَوۡ يَنفَعُونَكُمۡ أَوۡ يَضُرُّونَ ٧٣

74. Waxay dheheen waxaan hellay aabayaalkanno oo sidaas fali.

قَالُواْ بَلۡ وَجَدۡنَآ ءَابَآءَنَا كَذَٰلِكَ يَفۡعَلُونَ ٧٤

75. Wuxuu yidhi bal warrama waxaad caabudaysaan.

قَالَ أَفَرَءَيۡتُم مَّا كُنتُمۡ تَعۡبُدُونَ ٧٥

76. Idinka iyo aabayaalkiinnii horreeyey.

أَنتُمۡ وَءَابَآؤُكُمُ ٱلۡأَقۡدَمُونَ ٧٦

77. Hadday iyagu col ii yihiin Rabbiga caalamka mooyee.

فَإِنَّهُمۡ عَدُوّٞ لِّيٓ إِلَّا رَبَّ ٱلۡعَٰلَمِينَ ٧٧

Aayadahani waxay ka warrami addoonkii Alle iyo Rasuulkiisii ahaa imaamka kuwa toosan Nabi Ibraahim, wuxuuna Alle faray Rasuulkiisa Muxamed ah (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu ku akhriyo ummaddiisa inay ku daydaan, kali yeelidda cibaadada, tala saarashada Alle, ka fogaanshaha gaalimada, illeen Alle ayaa siiyey hanuun iyo wanaag uu ku diray waxay caabudi jireen qoomkiisii, isagoo u sheegay inayan wax tarayn cibaado waxaan ku maqlayn, waxna anfacayn, waxaase wax la caabudo oo laysku halleeyo ah Rabbiga caalamka ee awoodda leh, tan kale walaalnimadu waa tan iimaanka iyo islaanimada, wixii ka soo hadhayse waa col aan heshiis lahayn. **[Ash-Shucaraa': 69-77].**

78. Ee ah kan i abuuray ee ah kan i hanuunin.

ٱلَّذِي خَلَقَنِي فَهُوَ يَهۡدِينِ ٧٨

79. Kan i quudin ee i waraabin.

وَٱلَّذِي هُوَ يُطۡعِمُنِي وَيَسۡقِينِ ٧٩

80. Markaan bukoodana isagaa i caafiya.

وَإِذَا مَرِضۡتُ فَهُوَ يَشۡفِينِ ٨٠

81. Waana kan i dili ina noolayn.

وَٱلَّذِي يُمِيتُنِي ثُمَّ يُحۡيِينِ ٨١

82. Ee ah kaan damci inuu ii dhaafo gafafkayga maalinta abaal marinta.

وَٱلَّذِىٓ أَطۡمَعُ أَن يَغۡفِرَ لِى خَطِيٓـَٔتِى يَوۡمَ ٱلدِّينِ ﴿٨٢﴾

83. Allow i sii xikmo (Nabinnimo) ina haleeshii kuwa suubban.

رَبِّ هَبۡ لِى حُكۡمًا وَأَلۡحِقۡنِى بِٱلصَّٰلِحِينَ ﴿٨٣﴾

84. Iina yeel sheegid run ah (fiican) kuwa dambe.

وَٱجۡعَل لِّى لِسَانَ صِدۡقٍ فِى ٱلۡأٓخِرِينَ ﴿٨٤﴾

85. Igana yeel kuwa dhaxli jannada naciimo.

وَٱجۡعَلۡنِى مِن وَرَثَةِ جَنَّةِ ٱلنَّعِيمِ ﴿٨٥﴾

86. Una dambi dhaaf aabahay wuxuu ka mid ahaa kuwa dhumaye.

وَٱغۡفِرۡ لِأَبِىٓ إِنَّهُۥ كَانَ مِنَ ٱلضَّآلِّينَ ﴿٨٦﴾

87. Hana i dullayn maalinta la soo bixin (dadka).

وَلَا تُخۡزِنِى يَوۡمَ يُبۡعَثُونَ ﴿٨٧﴾

88. Maalintayna wax anfacayn xoolo iyo ilmo midna.

يَوۡمَ لَا يَنفَعُ مَالٌ وَلَا بَنُونَ ﴿٨٨﴾

89. Ruux ula yimaadda Alle qalbi fayow mooyee (iimaan).

إِلَّا مَنۡ أَتَى ٱللَّهَ بِقَلۡبٍ سَلِيمٍ ﴿٨٩﴾

Alle ayaa wax abuura, waxna hanuuniya, waxna quudiya, oo waraabiya, isagaana wax caafiya, waxna dila, waxna nooleeya, dambigana u dhaafa mu'miniinta, saas darteed yuu Nabi Ibraahim u warsaday inuu xikmo oo ah cilmi, Nabinnimo iyo wanaag siiyo. Dadkii fiicnaana raaciyo ammaan iyo qaddarinna ugu yeelo dadka dambe, kana yeelo kuwa dhaxli jannada, una dambi dhaafo aabihiis illeen wuxuu ka mid ahaa kuwa dhumaye, waxayna ahayd intayna u caddaan, iyo inuusan dullayn maalinta dadka la soo bixin, oon xoolo iyo carruur wax tarayn, ee camal fiican iyo qalbi nabadgalay kaliya wax tari.

Siciid binu Musayib wuxuu yidhi: qalbiga nabadgalay waa kan fayow, waana qalbiga mu'minka. Illeen qalbiga gaalka iyo munaafaqu waa bukaaye. Waana taas ku xidhnida Alle iyo aqoonsigiisu. **[Ash-Shucaraa': 78-89].**

90. Waana loo dhawayn jannada kuwa dhawrsada (mu'miniinta dhabta ah).

وَأُزۡلِفَتِ ٱلۡجَنَّةُ لِلۡمُتَّقِينَ ﴿٩٠﴾

91. Waana loo muujin jaxiimo kuwa baadiyoobay.
وَبُرِّزَتِ ٱلْجَحِيمُ لِلْغَاوِينَ ﴿٩١﴾

92. Waxaana lagu dhihi aaway waxaad caabudayseen.
وَقِيلَ لَهُمْ أَيْنَ مَا كُنتُمْ تَعْبُدُونَ ﴿٩٢﴾

93. Oo Alle ka soo hadhay maydiin gargaarayaan ama gargaarsanayaan.
مِن دُونِ ٱللَّهِ هَلْ يَنصُرُونَكُمْ أَوْ يَنتَصِرُونَ ﴿٩٣﴾

94. Waana lagu hambooriyey (tuuri) dhexdeeda iyaga iyo kuwa baadiyoobay.
فَكُبْكِبُوا۟ فِيهَا هُمْ وَٱلْغَاوُۥنَ ﴿٩٤﴾

95. Iyo junuudda (askarta) Ibliis dhammaan.
وَجُنُودُ إِبْلِيسَ أَجْمَعُونَ ﴿٩٥﴾

96. Waxayna odhan iyagoo dhexdeeda ku doodi.
قَالُوا۟ وَهُمْ فِيهَا يَخْتَصِمُونَ ﴿٩٦﴾

97. Alle Ayaan ku dhaarannaye waxaan ku sugnayn baadi cad.
تَٱللَّهِ إِن كُنَّا لَفِى ضَلَٰلٍ مُّبِينٍ ﴿٩٧﴾

98. Markaan idilla sinnay Rabbiga caalamka.
إِذْ نُسَوِّيكُم بِرَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٩٨﴾

99. Wax na dhumiyey oon dambiila yaasha ahayn ma jiro.
وَمَآ أَضَلَّنَآ إِلَّا ٱلْمُجْرِمُونَ ﴿٩٩﴾

100. Mana lihin wax noo shafeeca.
فَمَا لَنَا مِن شَٰفِعِينَ ﴿١٠٠﴾

101. Iyo saaxiib dhaw.
وَلَا صَدِيقٍ حَمِيمٍ ﴿١٠١﴾

102. Ee haddaan noqonno oon ahaanno mu'miniin fiicnaan lahaydaa.
فَلَوْ أَنَّ لَنَا كَرَّةً فَنَكُونَ مِنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٠٢﴾

103. Taas waxaa ku sugan calaamad badankoodna ma rumeeyo (xaqa).
إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَةً ۖ وَمَا كَانَ أَكْثَرُهُم مُّؤْمِنِينَ ﴿١٠٣﴾

104. Rabbigaana waa adkaade naxariista.
وَإِنَّ رَبَّكَ لَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلرَّحِيمُ ﴿١٠٤﴾

Qiyaamada xaalkeedu waa daran yahay sida wax badan quraanku ka warramay, jahannamana waxaa loo soo dhawayn ibliis gaalo iyo inta raacday naartaana lagu tuuri, oyna ku murmi dhexdeeda iyagoo calaacali oo qiran xumaantii iyo dambigii, wax u gargaari iyo wax u shafeecina ma jiro, waqtigaas oo kalena calaacal wax ma taro ee waxaa wax tara iimaan iyo wanaag hor marsasho. **[Ash-Shucaraa': 90-104].**

كَذَّبَتْ قَوْمُ نُوحٍ ٱلْمُرْسَلِينَ ﴿١٠٥﴾

105. Waxay beeniyeen qoomkii (Nabi) Nuux rasulladii.

إِذْ قَالَ لَهُمْ أَخُوهُمْ نُوحٌ أَلَا تَتَّقُونَ ﴿١٠٦﴾

106. Markuu ku yidhi walaalkood Nuux miyeydaan dhawrsanayn.

إِنِّى لَكُمْ رَسُولٌ أَمِينٌ ﴿١٠٧﴾

107. Anigu waxaan idiin ahay Rasuul aamin ah.

فَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَأَطِيعُونِ ﴿١٠٨﴾

108. Ee ka dhawrsada Alle ina adeeca.

وَمَآ أَسْـَٔلُكُمْ عَلَيْهِ مِنْ أَجْرٍ ۖ إِنْ أَجْرِىَ إِلَّا عَلَىٰ رَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿١٠٩﴾

109. Idinkana warsan maayo (xaqa) ujuuro, ajrigayga Rabbiga caalamkaan ka sugi.

فَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَأَطِيعُونِ ﴿١١٠﴾

110. Ee Alle ka dhawrsada ina adeeca.

* قَالُوٓا۟ أَنُؤْمِنُ لَكَ وَٱتَّبَعَكَ ٱلْأَرْذَلُونَ ﴿١١١﴾

111. Waxay dheheen ma waxaannu ku rumayn adooy ku raaceen kuwa dullaysan (xun xun).

قَالَ وَمَا عِلْمِى بِمَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿١١٢﴾

112. Wuxuu yidhi maxaan ka ogahay waxay fali.

إِنْ حِسَابُهُمْ إِلَّا عَلَىٰ رَبِّى ۖ لَوْ تَشْعُرُونَ ﴿١١٣﴾

113. Xisaabtooda Alle unbaa leh haddaad wax garanaysaan.

وَمَآ أَنَا۠ بِطَارِدِ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١١٤﴾

114. Aniguna ma eryayo mu'miniinta.

إِنْ أَنَا۠ إِلَّا نَذِيرٌ مُّبِينٌ ﴿١١٥﴾

115. Waxaan u dige cad ahayna ma ihi.

Qisada Nabi Nuux horaan u soo sheegnay wayna imaan doontaa, waxyaalahase ay halkan taabatay waxaa ka mid ah caqli xumida gaalada iyo inay dadka ku qiimeeyaan xoolaha iyo muuqaalka, tan kale in xaqa loo siman yahay cid gaar

loogu dhaqaalayna ayna jirin, ajriga iyo abaal marinta xaq u yeedhayaashana Alle ayaa leh, illeen abaal marin adduun wax kuuma tartee, taasna waxay ku tusin in ciddii wax bari dadka oo xaqa tusi looga baahan yahay inay dhawraan caddaaladda iyo ku xidhnaanta Alle. **[Ash-Shucaraa': 105-115].**

قَالُواْ لَئِن لَّمْ تَنتَهِ يَٰنُوحُ لَتَكُونَنَّ مِنَ ٱلْمَرْجُومِينَ ﴿١١٦﴾

116. Waxay dheheen haddaadan joogin Nuuxow waxaad noqon kuwa la dhagaxyeeyo.

قَالَ رَبِّ إِنَّ قَوْمِى كَذَّبُونِ ﴿١١٧﴾

117. Wuxuuna yidhi Allow qoomkaygii waa i beeniyeen.

فَٱفْتَحْ بَيْنِى وَبَيْنَهُمْ فَتْحًا وَنَجِّنِى وَمَن مَّعِىَ مِنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١١٨﴾

118. Ee nakala xukun dhexdannada, ina kori ani iyo inta ila jirta ee mu'miniinta ah.

فَأَنجَيْنَٰهُ وَمَن مَّعَهُۥ فِى ٱلْفُلْكِ ٱلْمَشْحُونِ ﴿١١٩﴾

119. Waxaannu ku korinnay isaga iyo intii la jirtay doontii buuxday.

ثُمَّ أَغْرَقْنَا بَعْدُ ٱلْبَاقِينَ ﴿١٢٠﴾

120. Ka dibna waxaan maanshaynay kuwii hadhay (gaaladii).

إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَةً ۖ وَمَا كَانَ أَكْثَرُهُم مُّؤْمِنِينَ ﴿١٢١﴾

121. Taasna waxaa ku sugan calaamad mana aha badankoodu kuwo rumayn.

وَإِنَّ رَبَّكَ لَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلرَّحِيمُ ﴿١٢٢﴾

122. Rabbigaana waa adkaade naxariista.

Markuu Nabi Nuux u yeedhay qoomkiisii habeen iyo dharaarba, muddo dheerna la noolaa diideenna xaqii yey goosteen caadadii xumayd ee xaqdiidayaasha oo ah inay la dagaallamaan Nabigaas wanaagga fari, waxayna ku haddideen inay dhagax la dhici hadduusan joogin, joojinna xaq u yeedhidda, Alle ayaase kala xukumay oo koriyey Nuux iyo mu'miniintii la jirtay, halaagayna gaaladii xaqa diidday, taasna Alle ayaa u yaboohay kuwa xaqa ku taagan inuu u gargaaro markay run sheegaan oo fuliyaan sharciga Alle kuna dhaqmaan. **[Ash-Shucaraa': 116-122].**

كَذَّبَتْ عَادٌ ٱلْمُرْسَلِينَ ﴿١٢٣﴾

123. Waxay beeniyeen caad rasuulladii.

إِذْ قَالَ لَهُمْ أَخُوهُمْ هُودٌ أَلَا تَتَّقُونَ ﴿١٢٤﴾

124. Markuu ku yidhi walaalkood huud miyeydaan dhawrsanayn.

125. Anigu waxaan idiin ahay rasuul aamin ah.
إِنِّي لَكُمْ رَسُولٌ أَمِينٌ ﴿١٢٥﴾

126. Ee ka dhawrsada Alle ina adeeca.
فَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَأَطِيعُونِ ﴿١٢٦﴾

127. Idinkamana warsanaayo xaqa ujuuro, ajrigaygana Rabbiga caalamkaan ka sugi.
وَمَآ أَسْـَٔلُكُمْ عَلَيْهِ مِنْ أَجْرٍ ۖ إِنْ أَجْرِىَ إِلَّا عَلَىٰ رَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿١٢٧﴾

128. Miyaad ka dhisaysaan meel sare oo dhan calaamad (daar) idinkoo ciyaari.
أَتَبْنُونَ بِكُلِّ رِيعٍ ءَايَةً تَعْبَثُونَ ﴿١٢٨﴾

129. Ood yeelanaysaan masaanic (dhismo) inaad waartaan darteed.
وَتَتَّخِذُونَ مَصَانِعَ لَعَلَّكُمْ تَخْلُدُونَ ﴿١٢٩﴾

130. Haddaad wax qabataanna u ciqaabtaan si daran.
وَإِذَا بَطَشْتُم بَطَشْتُمْ جَبَّارِينَ ﴿١٣٠﴾

131. Ee Alle ka dhawrsada ina adeeca.
فَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَأَطِيعُونِ ﴿١٣١﴾

132. Kana dhawrsada Allaha idin siiyey waxaad ogtihiin.
وَٱتَّقُوا۟ ٱلَّذِىٓ أَمَدَّكُم بِمَا تَعْلَمُونَ ﴿١٣٢﴾

133. Wuxuu idin siiyey xoolo iyo carruur.
أَمَدَّكُم بِأَنْعَٰمٍ وَبَنِينَ ﴿١٣٣﴾

134. Iyo beero iyo ilo.
وَجَنَّٰتٍ وَعُيُونٍ ﴿١٣٤﴾

135. Waxaana idiinka digi cadaab maalin wayn.
إِنِّىٓ أَخَافُ عَلَيْكُمْ عَذَابَ يَوْمٍ عَظِيمٍ ﴿١٣٥﴾

Reer Caad wax badan yuu quraanku ka warramay, waxaase mudan in laysku baraarujiyo siday wax u dhisan jireen, kibir, isla wayni iyo waarid darteed, maxayse u tartay, waxba. Waxaa la sheegay in markuu arkay abuu dardaa' waxay muslimiintu ka dhiseen Quudhah inuu ka istaagay masaajidka, kuna dhawaaqay reer dimishiqow markay ku soo kulmeenna uu Alle ammaanay oos yidhi: miyeydaan xishoonayn, waxaad kulminaysaan waxaydaan cunayn, waxaad dhisaysaan waxaydaan dagayn, waxaadna doonaysaan waxaydaan gaadhayn, waxaa idinka horreeyey Caad oo hanatay Cadan iyo Cummaan dhexdeeda ee yaa dhaxalkoodii iga siin labo dirham. **[Ash-Shucaraa': 123-135].**

136. Waxay dheheen waxaa isu kaanna mid ah waanisayaa ama maadan waanininaa.

قَالُواْ سَوَآءٌ عَلَيۡنَآ أَوَعَظۡتَ أَمۡ لَمۡ تَكُن مِّنَ ٱلۡوَٰعِظِينَ ١٣٦

137. Kanna ma aha waxaan dabeecaddii «diintii» dadkii hore ahayn.

إِنۡ هَٰذَآ إِلَّا خُلُقُ ٱلۡأَوَّلِينَ ١٣٧

138. Nalamana cadaabayo.

وَمَا نَحۡنُ بِمُعَذَّبِينَ ١٣٨

139. Wayna beeniyeen, markasaan halaagnay. Taasina waxaa ku sugan calaamad, mana aha badankoodu kuwo rumayn.

فَكَذَّبُوهُ فَأَهۡلَكۡنَٰهُمۡۗ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَأٓيَةٗۖ وَمَا كَانَ أَكۡثَرُهُم مُّؤۡمِنِينَ ١٣٩

140. Rabbigaana waa adkaade naxariista.

وَإِنَّ رَبَّكَ لَهُوَ ٱلۡعَزِيزُ ٱلرَّحِيمُ ١٤٠

141. Waxay beenisay thamuud rasuulladii.

كَذَّبَتۡ ثَمُودُ ٱلۡمُرۡسَلِينَ ١٤١

142. Markuu ku yidhi walaalkood (Nabi) Saalax miyaydaan dhawrsanayn.

إِذۡ قَالَ لَهُمۡ أَخُوهُمۡ صَٰلِحٌ أَلَا تَتَّقُونَ ١٤٢

143. Waxaan idiin ahay rasuul aamin ah.

إِنِّي لَكُمۡ رَسُولٌ أَمِينٞ ١٤٣

144. Ee ka dhawrsada Alle ina adeeca.

فَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ وَأَطِيعُونِ ١٤٤

145. Idinkamana warsanaayo xaqa ujuuro, ajrigayga Rabbiga caalamkaan ka sugi.

وَمَآ أَسۡـَٔلُكُمۡ عَلَيۡهِ مِنۡ أَجۡرٍۖ إِنۡ أَجۡرِيَ إِلَّا عَلَىٰ رَبِّ ٱلۡعَٰلَمِينَ ١٤٥

Markay qoomkii Nabi Huud ka madax adaygeen xaqii ooy isugu mid noqotay waano iyo la'aanteed, diideenna wax u sheeggii, sheegteenna inaan la cadaabayn yaa Alle halaagay, taasina waa abaalka xaqdiidayaasha.

Sidoo kale waxaa Alle u diray Thamuud Nabi Saalax, wuxuuna la maray waddaday la mareen Nabiyadii kale, wuxuu xaalku ku dambeeyeyna wuu imaan, waxaadse mooddaa in gaaladu ceel kaliya ka cabbeen, waa ceelka xumaanta. **[Ash-Shucaraa': 136-145].**

146. Ma waxaa laydinkaga tagi halkan idinkoo aamina.

أَتُتْرَكُونَ فِي مَا هَٰهُنَآ ءَامِنِينَ ﴿١٤٦﴾

147. Oo ku sugan bustaanno iyo ilo (socda).

فِي جَنَّٰتٍ وَعُيُونٍ ﴿١٤٧﴾

148. Iyo beero iyo timir fiiddeedu bisayl tahay.

وَزُرُوعٍ وَنَخْلٍ طَلْعُهَا هَضِيمٌ ﴿١٤٨﴾

149. Ood ka qoranaysaan buuraha guryo idinkoo kibirsan.

وَتَنْحِتُونَ مِنَ ٱلْجِبَالِ بُيُوتًا فَٰرِهِينَ ﴿١٤٩﴾

150. Ee Alle ka dhawrsada ina adeeca.

فَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَأَطِيعُونِ ﴿١٥٠﴾

151. Hana adeecina «maqlina» amarka xadgudbayaasha.

وَلَا تُطِيعُوٓا۟ أَمْرَ ٱلْمُسْرِفِينَ ﴿١٥١﴾

152. Ah kuwa fasaadiya dhulka oon hagaajinayn.

ٱلَّذِينَ يُفْسِدُونَ فِي ٱلْأَرْضِ وَلَا يُصْلِحُونَ ﴿١٥٢﴾

153. Waxay dheheen waxaad uun ka mid tahay kuwa la sixray.

قَالُوٓا۟ إِنَّمَآ أَنتَ مِنَ ٱلْمُسَحَّرِينَ ﴿١٥٣﴾

154. Mana tihid waxaan dad nala mid ah ahayn ee noo keen aayad haddaad run sheegi.

مَآ أَنتَ إِلَّا بَشَرٌ مِّثْلُنَا فَأْتِ بِـَٔايَةٍ إِن كُنتَ مِنَ ٱلصَّٰدِقِينَ ﴿١٥٤﴾

155. Wuxuu yidhi tani waa hal, maalin bay cabbi idinkuna maalin baad cabbaysaan la yaqaan.

قَالَ هَٰذِهِۦ نَاقَةٌ لَّهَا شِرْبٌ وَلَكُمْ شِرْبُ يَوْمٍ مَّعْلُومٍ ﴿١٥٥﴾

156. Ee ha ku taabannina xumaan, oos idin qabto cadaab maalin wayn.

وَلَا تَمَسُّوهَا بِسُوٓءٍ فَيَأْخُذَكُمْ عَذَابُ يَوْمٍ عَظِيمٍ ﴿١٥٦﴾

157. Wayse dileen waxayna ahaadeen kuwo qoomameeya.

فَعَقَرُوهَا فَأَصْبَحُوا۟ نَٰدِمِينَ ﴿١٥٧﴾

158. Waxaana qabtay cadaab taasna waxaa ku sugan calaamad, badankoodna ma aha kuwo rumayn (xaqa).

فَأَخَذَهُمُ ٱلْعَذَابُ ۗ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَءَايَةً ۖ وَمَا كَانَ أَكْثَرُهُم مُّؤْمِنِينَ ﴿١٥٨﴾

159. Rabbigaana waa adkaade naxariista.

وَإِنَّ رَبَّكَ لَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلرَّحِيمُ ﴿١٥٩﴾

Cid ladnaan iyo kibir ku waari ma jirto, qoomkii Nabi Saalaxna markay xaqii ka madax adaygeen oo beeniyeen Nabigii oy dileen hashii calaamadda u ahayd yaa Alle halaagay oo ciqaabay, adduunyana waa beer cagaaran oo maruun ingagi, waxaase habboon in si fiican loogu dhaqmo xaqa. **[Ash-Shucaraa': 146-159].**

160. Waxay beeniyeen qoomkii (Nabi) Luudh rasuulladii.

كَذَّبَتْ قَوْمُ لُوطٍ ٱلْمُرْسَلِينَ ﴿١٦٠﴾

161. Markuu ku yidhi walaalkood Luudh miyeydaan dhawrsanayn.

إِذْ قَالَ لَهُمْ أَخُوهُمْ لُوطٌ أَلَا تَتَّقُونَ ﴿١٦١﴾

162. Waxaan idiin ahay Rasuul aaminee.

إِنِّى لَكُمْ رَسُولٌ أَمِينٌ ﴿١٦٢﴾

163. Ee ka dhawrsada Alle ina adeeca.

فَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَأَطِيعُونِ ﴿١٦٣﴾

164. Idinkama warsanaayo xaqa ujuuro, ajrigayga Rabbiga caalamkaan ka sugi.

وَمَآ أَسْـَٔلُكُمْ عَلَيْهِ مِنْ أَجْرٍ ۖ إِنْ أَجْرِىَ إِلَّا عَلَىٰ رَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿١٦٤﴾

165. Ma waxaad u tagaysaan ragga caalamka.

أَتَأْتُونَ ٱلذُّكْرَانَ مِنَ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿١٦٥﴾

166. Ood ka tagaysaan waxa Alle idiin abuuray oo haweenkiinna ah, waxaadse tihiin kuwo xadgudba.

وَتَذَرُونَ مَا خَلَقَ لَكُمْ رَبُّكُم مِّنْ أَزْوَٰجِكُم ۚ بَلْ أَنتُمْ قَوْمٌ عَادُونَ ﴿١٦٦﴾

167. Waxay dheheen haddaadan joogin Luudhow waxaad noqon kuwa la bixiyo.

قَالُوا۟ لَئِن لَّمْ تَنتَهِ يَٰلُوطُ لَتَكُونَنَّ مِنَ ٱلْمُخْرَجِينَ ﴿١٦٧﴾

168. Wuxuu yidhi (Luudh) anigu camalkiinna waan la cadhaysnahay.

قَالَ إِنِّى لِعَمَلِكُم مِّنَ ٱلْقَالِينَ ﴿١٦٨﴾

169. Allow iga kori aniga iyo ehelkaygaba waxay falayaan.

رَبِّ نَجِّنِى وَأَهْلِى مِمَّا يَعْمَلُونَ ﴿١٦٩﴾

فَنَجَّيْنَٰهُ وَأَهْلَهُۥٓ أَجْمَعِينَ ﴿١٧٠﴾

170. Waana korinnay isaga iyo ehelkiisiiba dhammaan.

إِلَّا عَجُوزًا فِى ٱلْغَٰبِرِينَ ﴿١٧١﴾

171. Habar ku hadhay mooyee (haweeneydiisii).

ثُمَّ دَمَّرْنَا ٱلْءَاخَرِينَ ﴿١٧٢﴾

172. Markaasaan halaagnay intii kale.

وَأَمْطَرْنَا عَلَيْهِم مَّطَرًا ۖ فَسَآءَ مَطَرُ ٱلْمُنذَرِينَ ﴿١٧٣﴾

173. Waxaan ku soo daynay (roob dhagax naara) waxaana u xun roobka kuwa loo digay.

إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَةً ۖ وَمَا كَانَ أَكْثَرُهُم مُّؤْمِنِينَ ﴿١٧٤﴾

174. Taasna waxaa ku sugan calaamad, badankoodna ma aha kuwo rumayn.

وَإِنَّ رَبَّكَ لَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلرَّحِيمُ ﴿١٧٥﴾

175. Rabbigaana waa adkaade naxaariista.

Qoomkii Nabi Luudh waxay ku caan ahaayeen wax sheegiddiisa laga xishoodo oo ah inay ragga aadi jireen haweenka ka sokow, waana caado xun oo ciqaab mudata, waxaana loo ciqaabay si daran, cid kasta oo waxyaalahaas oo kale ku kacdana waa cid dullaysan oo wasakhawday, waxayna dharbaaxo ku tahay kuwa buka ee dabaalan waxaas. **[Ash-Shucaraa': 160-175].**

كَذَّبَ أَصْحَٰبُ لْـَٔيْكَةِ ٱلْمُرْسَلِينَ ﴿١٧٦﴾

176. Waxay beeniyeen Kayntii ehelkeedii rasuulladii.

إِذْ قَالَ لَهُمْ شُعَيْبٌ أَلَا تَتَّقُونَ ﴿١٧٧﴾

177. Markuu ku yidhi Nabi Shucayb miyeydaan dhawrsanayn.

إِنِّى لَكُمْ رَسُولٌ أَمِينٌ ﴿١٧٨﴾

178. Waxaan idiin ahay rasuul aaminee.

فَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَأَطِيعُونِ ﴿١٧٩﴾

179. Ee ka dhawrsada Alle ina adeeca.

وَمَآ أَسْـَٔلُكُمْ عَلَيْهِ مِنْ أَجْرٍ ۖ إِنْ أَجْرِىَ إِلَّا عَلَىٰ رَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿١٨٠﴾

180. Idinkama warsanaayo xaqa ujuuro, ajrigayga Rabbiga caalamkaan ka sugi.

۞ أَوْفُوا۟ ٱلْكَيْلَ وَلَا تَكُونُوا۟ مِنَ ٱلْمُخْسِرِينَ ﴿١٨١﴾

181. Oofiya (dhammaystira) beegidda hana ka mid noqonnina kuwa nusqaamiya.

182. Una miisaama caddaalad toosan.

وَزِنُوا۟ بِٱلْقِسْطَاسِ ٱلْمُسْتَقِيمِ ﴿١٨٢﴾

183. Hana ka nusqaaminnina dadka waxooda hana xumaynina dhulka idinkoo fasaadin.

وَلَا تَبْخَسُوا۟ ٱلنَّاسَ أَشْيَآءَهُمْ وَلَا تَعْثَوْا۟ فِى ٱلْأَرْضِ مُفْسِدِينَ ﴿١٨٣﴾

184. Kana dhawrsada Allaha idin abuuray iyo khalqigii horreeyey.

وَٱتَّقُوا۟ ٱلَّذِى خَلَقَكُمْ وَٱلْجِبِلَّةَ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿١٨٤﴾

Qoomkii Nabi Shucayb oo dhulka Madyan daganaa waxay beeniyeen xaqii, waxayna ku caan baxeen inay nusqaamiyaan miisaanka iyo suuskaba, dadkana saas uga nusqaamiyaan xaqooda, wuxuuna Nabi Shucayb isku dayey inuu ka reebo arrintaas, dhulkana ayan fasaadin, wayse ka madax adaygeen xaalkaas sida ka muuqata aayadaha soo socda. Waxaana dhab ah in cunnada oo dadka lagu khayaamo lagana nusqaamiyo ay tahay arrin xun oo ciqaab iyo halaag mudan, yaase garansiin kuwa ku dhaqma xaalkaas Alle mooyee, ciddii caqlilehse waa inay ka joogtaa ka hor maalinta dadku u istaagi Ilaaha caalamka. **[Ash-Shucaraa': 176-184].**

185. Waxay dheheen waxaad uun tahay kuwa la sixray.

قَالُوٓا۟ إِنَّمَآ أَنتَ مِنَ ٱلْمُسَحَّرِينَ ﴿١٨٥﴾

186. Mana tihid waxaan dad nala mid ah ahayn, waxaana kuu malaynaynaa kuwa beenaalayaasha ah.

وَمَآ أَنتَ إِلَّا بَشَرٌ مِّثْلُنَا وَإِن نَّظُنُّكَ لَمِنَ ٱلْكَٰذِبِينَ ﴿١٨٦﴾

187. Ee nagu soo rid goosimo samada ka mid ah haddaad run sheegi.

فَأَسْقِطْ عَلَيْنَا كِسَفًا مِّنَ ٱلسَّمَآءِ إِن كُنتَ مِنَ ٱلصَّٰدِقِينَ ﴿١٨٧﴾

188. Wuxuu yidhi Rabbigay baa og waxaad falaysaan.

قَالَ رَبِّىٓ أَعْلَمُ بِمَا تَعْمَلُونَ ﴿١٨٨﴾

189. Wayna beeniyeen waxaana qabtay cadaab maalintii hadhka, waana cadaab maalin wayn.

فَكَذَّبُوهُ فَأَخَذَهُمْ عَذَابُ يَوْمِ ٱلظُّلَّةِ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ عَذَابَ يَوْمٍ عَظِيمٍ ﴿١٨٩﴾

190. Arrintaasna waxaa ku sugan calaamad, mana ahayn badankoodu kuwa rumeeya.

إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَةً ۖ وَمَا كَانَ أَكْثَرُهُم مُّؤْمِنِينَ ﴿١٩٠﴾

191. Rabbigaana waa adkaade naxariista.

وَإِنَّ رَبَّكَ لَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلرَّحِيمُ ﴿١٩١﴾

Waxay kuwanna ku jawaabeen jawaabtii kuwii ka horreeyey oo kale, waxayna ku sheegeen sixir, wayna beeniyeen, waxay warsadeen in cirka goosino cadaaba looga soo rido, Rabbise waa og yahay waxay fali waxaana qabtay cadaab hadheeyey oo wayn. Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: wuxuu Ilaahay ku soo daayey onkod iyo kulayl daran oo ku dhajiyey neefta, markaasay ka baxeen guryaha iyagoo u carari dibadda, markaasaa Alle daruur ka hadhaysa qorraxda ku soo daayey markay ku soo kulmeenna uu Alle ku soo daayey naar gubtay. Ciqaabta Alle na kama fogo daalimiinta xaq diidayaasha ah. **[Ash-Shucaraa': 185-191].**

192. Quraankuna waa soo dejin Rabbiga caalamka.

وَإِنَّهُۥ لَتَنزِيلُ رَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿١٩٢﴾

193. Waxaa kula soo degan ruux aamin ah (Jibriil).

نَزَلَ بِهِ ٱلرُّوحُ ٱلْأَمِينُ ﴿١٩٣﴾

194. Qalbigaaga inaad ahaato kuwa ku diga.

عَلَىٰ قَلْبِكَ لِتَكُونَ مِنَ ٱلْمُنذِرِينَ ﴿١٩٤﴾

195. Af carabi ahoo cad.

بِلِسَانٍ عَرَبِيٍّ مُّبِينٍ ﴿١٩٥﴾

196. (Xuska) Quraanka (iyo magaciisuna) wuxuu ku sugnaa kutubtii hore.

وَإِنَّهُۥ لَفِى زُبُرِ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿١٩٦﴾

197. Miyeyna calaamad ugu fillayn inuu yaqaanno culimadii banii israa'iil.

أَوَلَمْ يَكُن لَّهُمْ ءَايَةً أَن يَعْلَمَهُۥ عُلَمَٰٓؤُا۟ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ﴿١٩٧﴾

198. Haddaan ku soo dejinno quraankan cajamiga qaarkiis.

وَلَوْ نَزَّلْنَٰهُ عَلَىٰ بَعْضِ ٱلْأَعْجَمِينَ ﴿١٩٨﴾

199. Oo uu ku akhriyo korkooda mayna rumeeyeen.

فَقَرَأَهُۥ عَلَيْهِم مَّا كَانُوا۟ بِهِۦ مُؤْمِنِينَ ﴿١٩٩﴾

200. Saasaan u galinnay diiddada quluubta dambiilayaasha.

كَذَٰلِكَ سَلَكْنَٰهُ فِى قُلُوبِ ٱلْمُجْرِمِينَ ﴿٢٠٠﴾

201. Mana rumaynayaan xaqa intay ka arkaan cadaab daran.

لَا يُؤْمِنُونَ بِهِۦ حَتَّىٰ يَرَوُا۟ ٱلْعَذَابَ ٱلْأَلِيمَ ﴿٢٠١﴾

202. Oos ugu yimaaddo cadaabku kado iyagoon ogayn.

فَيَأْتِيَهُم بَغْتَةً وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ ﴿٢٠٢﴾

203. Oy dhahaan ma nala sugi.
فَيَقُولُواْ هَلۡ نَحۡنُ مُنظَرُونَ ٢٠٣

204. Ma cadaabkannagay dadajisan.
أَفَبِعَذَابِنَا يَسۡتَعۡجِلُونَ ٢٠٤

Aayadahan Alle wuxuu ku tilmaamay quraanka inuu yahay soo dejin Alle, oo Jibriil u soo dhiibay, kuna soo dejiyey qalbiga Nabiga, luuqadda carabiga ahna ku soo dejiyey, kutubihii horana lagu caddeeyey, culimadii banii-israa'iilla ay ogaayeen. Dambiilayaashuse ay beeniyeen, ayna saas ahaadaan intay ka arkaan cadaab daran, uguna yimaadda kado, iyagoon ogayn oy markaas calaacalaan, yidhaahdaanna maa nala sugo, waxayse dedejisanayeen cadaabka. Sufyaan wuxuu yidhi: waxyi dhammaantii wuxuu ku dagayey carabi ee waxaa tarjumayey Nabiyada. Waxaa weriyay Ibnulmundir iyo Ibnuabiixaatim **[Ash-Shucaraa': 192-204].**

205. Ka warran haddaan u raaxayno sanooyin.
أَفَرَءَيۡتَ إِن مَّتَّعۡنَٰهُمۡ سِنِينَ ٢٠٥

206. Markaas uu u yimaaddo wixii loogu goodinaayey.
ثُمَّ جَآءَهُم مَّا كَانُواْ يُوعَدُونَ ٢٠٦

207. Muxuu uga tari xaggooda wixii loogu raaxeeyey.
مَآ أَغۡنَىٰ عَنۡهُم مَّا كَانُواْ يُمَتَّعُونَ ٢٠٧

208. Magaalo aan halaagno oon loo diginna ma jirto.
وَمَآ أَهۡلَكۡنَا مِن قَرۡيَةٍ إِلَّا لَهَا مُنذِرُونَ ٢٠٨

209. Waano darteed, mana nihin daalimiin.
ذِكۡرَىٰ وَمَا كُنَّا ظَٰلِمِينَ ٢٠٩

210. Lamana soo degto quraanka shayaadiintu.
وَمَا تَنَزَّلَتۡ بِهِ ٱلشَّيَٰطِينُ ٢١٠

211. Kumana habboona mana karaan.
وَمَا يَنۢبَغِي لَهُمۡ وَمَا يَسۡتَطِيعُونَ ٢١١

212. Shayaadiintu maqalka waa ka fogyihiin.
إِنَّهُمۡ عَنِ ٱلسَّمۡعِ لَمَعۡزُولُونَ ٢١٢

213. Ee ha caabudin (baryin) Alle miciisa ilaah kale ood noqoto kuwa la cadaabo.
فَلَا تَدۡعُ مَعَ ٱللَّهِ إِلَٰهًا ءَاخَرَ فَتَكُونَ مِنَ ٱلۡمُعَذَّبِينَ ٢١٣

214. Una dig qaraabadaada kuu sii dhaw.
وَأَنذِرۡ عَشِيرَتَكَ ٱلۡأَقۡرَبِينَ ٢١٤

وَٱخۡفِضۡ جَنَاحَكَ لِمَنِ ٱتَّبَعَكَ مِنَ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ ﴿٢١٥﴾

215. Una raarici garabkaaga (u naxariiso) ciddii ku raacda oo mu'miniinta ah.

فَإِنۡ عَصَوۡكَ فَقُلۡ إِنِّي بَرِيٓءٞ مِّمَّا تَعۡمَلُونَ ﴿٢١٦﴾

216. Hadday ku caasiyaanna waxaad dhahdaa anigu bari baan ka ahay waxaad falaysaan.

Raaxo adduunna wax ma tarto markay ciqaabtu timaaddo, waxaa sugnaaday in la keeni qiyaamada gaalka oo naarta la tiimbin markaas la dhihi: khayr waligaa ma aragtay, nicmo waligaa ma aragtay, oo uu dhihi: wallaahi maya, la keenina kii ugu dhibaato badnaa adduunka oo la taabsiin jannada markaas la dhihi: ma aragtay xumaan waligaa oos dhihi waligay maya, Nabiga iyo quraanka shaydaan uma soo dhawaado, lamana so degin, waase ka fog yihiin, cibaadana Alle kaliyaa muta, Alle na wuxuu faray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu marka hore u digo qaraabada illeen haddii kale see dadka kale wax u rumayn, wuuna yeelay Nabigu sidaas, tan kale wuxuu Alle faray inuu u naxariisto mu'miniinta, islaamkuna waa diin isu naxariisasho. **[Ash-Shucaraa': 205-216].**

وَتَوَكَّلۡ عَلَى ٱلۡعَزِيزِ ٱلرَّحِيمِ ﴿٢١٧﴾

217. Talo saaro Allaha adkaada ee naxariista.

ٱلَّذِي يَرَىٰكَ حِينَ تَقُومُ ﴿٢١٨﴾

218. Ee ku arka markaad kici.

وَتَقَلُّبَكَ فِي ٱلسَّٰجِدِينَ ﴿٢١٩﴾

219. Iyo la gagadoonkaaga kuwa tukan.

إِنَّهُۥ هُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلۡعَلِيمُ ﴿٢٢٠﴾

220. Alle na waa maqle og.

هَلۡ أُنَبِّئُكُمۡ عَلَىٰ مَن تَنَزَّلُ ٱلشَّيَٰطِينُ ﴿٢٢١﴾

221. Ma idiinka warramaa ruuxay ku soo degi shayaadiintu.

تَنَزَّلُ عَلَىٰ كُلِّ أَفَّاكٍ أَثِيمٖ ﴿٢٢٢﴾

222. Waxay ku soo degi beenaale dambi badan oo dhan.

يُلۡقُونَ ٱلسَّمۡعَ وَأَكۡثَرُهُمۡ كَٰذِبُونَ ﴿٢٢٣﴾

223. Waxayna ridi (oo ay u gudbin beenaalayaalkaas) maqalka (waxa ay soo maqleen) badankoodna waa beenaalayaal (halkii run boqol been ah ayay ku daraan).

224. Gabayaana waxaa raaca kuwa baadida ah.

وَٱلشُّعَرَآءُ يَتَّبِعُهُمُ ٱلْغَاوُۥنَ ﴿٢٢٤﴾

225. Miyaadan arkin in iyagu tog kasta (xumaan) ay ku dhex wareersan yihiin.

أَلَمْ تَرَ أَنَّهُمْ فِى كُلِّ وَادٍ يَهِيمُونَ ﴿٢٢٥﴾

226. Oyna sheegi waxayna falayn.

وَأَنَّهُمْ يَقُولُونَ مَا لَا يَفْعَلُونَ ﴿٢٢٦﴾

227. Kuwa xaqa rumeeyey mooyee oo camal fiican fala oo xusa Alle wax badan, oo gargaarta dulmi ka dib, waxayna ogaan doonaan kuwii dulmi falay soo noqoshaday soo noqdaan (qiyaamada).

إِلَّا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ وَذَكَرُوا۟ ٱللَّهَ كَثِيرًا وَٱنتَصَرُوا۟ مِنۢ بَعْدِ مَا ظُلِمُوا۟ ۗ وَسَيَعْلَمُ ٱلَّذِينَ ظَلَمُوٓا۟ أَىَّ مُنقَلَبٍ يَنقَلِبُونَ ﴿٢٢٧﴾

Waa in la talo saarto Allaha adkaada ee naxariista, ee ku arka markaad istaagi iyo ku dhex gagadoonkaaga kuwa tukan ee maqli ee og. Shaydaanna wuxuu ku soo degaa been badane, dambi badan, heesta iyo gabayga oo waqtiga kaa dhumiyana waa caayan yihiin, waxaana raaca gabayaaga kuwa iska baadida ah, waxaana ka mid ah caadada gabayaaga inay ku wareeraan oo dhexgalaan wax kasta, ooy sheegaanna waxayna falin, marka laga reebo kuwa xaqa rumeeyey ee wanaagga fala oo gargaarta intii la dulmiyey, daalimna wuxuu ogaan markuu Alle u noqdo, gabayguna markuu bato oo wax walba la sheego, oon runta laga sheegin, oo lagu caayo cidaan mudan, laguna ammaano cidaan mudan waa aafo iyo balaayo ruuxa ka buuxda, islaamkuna ma oggola, siduu Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) u yidhi: in laabta midkiin malaxu dhaamiso yaa ka khayr roon inuu gabay ka buuxsamo. (Imaam Axmed). Hadduuse yahay mid xaqa loogu hiillin, wanaaggana fari, xumaantana reebi kaasi ma cayna mana xuma. **[Ash-Shucaraa': 217-227].**

Suurat An-Naml

سُورَةُ النَّمۡلِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

طسٓۚ تِلۡكَ ءَايَٰتُ ٱلۡقُرۡءَانِ وَكِتَابٖ مُّبِينٖ ١

1. (Labada xaraf ee hore iyagoo kale waan soo marnay) in ay ku tusin mucjisada quraanka, taasi waa aayaadka quraanka iyo kitaabka cad.

هُدٗى وَبُشۡرَىٰ لِلۡمُؤۡمِنِينَ ٢

2. Waana hanuunka iyo bishaarada mu'miniinta.

ٱلَّذِينَ يُقِيمُونَ ٱلصَّلَوٰةَ وَيُؤۡتُونَ ٱلزَّكَوٰةَ وَهُم بِٱلۡأٓخِرَةِ هُمۡ يُوقِنُونَ ٣

3. Ee ah kuwa ooga salaadda oo guta zakada oo aakhiro yaqiinin.

إِنَّ ٱلَّذِينَ لَا يُؤۡمِنُونَ بِٱلۡأٓخِرَةِ زَيَّنَّا لَهُمۡ أَعۡمَٰلَهُمۡ فَهُمۡ يَعۡمَهُونَ ٤

4. Kuwaanse rumayn aakhiro waxaan u qurxinnay camalkooda waana ku indho la' yihiin (wareersan yihiin).

أُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ لَهُمۡ سُوٓءُ ٱلۡعَذَابِ وَهُمۡ فِي ٱلۡأٓخِرَةِ هُمُ ٱلۡأَخۡسَرُونَ ٥

5. Kuwaasi waa kuwuu u sugnaaday cadaab xun aakharana iyaga unbaa khasaaray.

وَإِنَّكَ لَتُلَقَّى ٱلۡقُرۡءَانَ مِن لَّدُنۡ حَكِيمٍ عَلِيمٍ ٦

6. Adiguna Nabiyow waxaad kala kulmi quraanka Ilaaha falka san ee og agtiisa.

Suuraddu waxay ka warrami in quraanka kariimka ah hanuun iyo bishaaro u yahay mu'miniita xaqa rumaysan ee salaadda si fiican u guta, zakadana bixiya, aakharana yaqiinsan, kuwaanse rumaynin aakharo waxaa loo qurxiyey camalkooda xun oyna ku dhex wareersan yihiin, waana kuwa cadaab xun u

sugnaaday oo khasaaray aakharo illeen wey beeniyeene. Dhabtuna waa in quraanku ka soo degay Ilaaha xakiimka ah ee wax walba og xaggiisa, warkiisuna waa run cad. Xukunkiisuna waa caddaalad dhammaystiran. Waxaase loo baahan yahay rumayn, ku dhaqan, ugu yeedhid iyo dhawrid. **[An-Naml: 1-6].**

إِذْ قَالَ مُوسَىٰ لِأَهْلِهِۦٓ إِنِّىٓ ءَانَسْتُ نَارًا سَـَٔاتِيكُم مِّنْهَا بِخَبَرٍ أَوْ ءَاتِيكُم بِشِهَابٍ قَبَسٍ لَّعَلَّكُمْ تَصْطَلُونَ ﴿٧﴾

7. Xusuuso markuu ku yidhi Nabi Muuse ehelkiisa anugu waxaan arkaa iftiin waxaan idiinka keeni xaggiisa war ama waxaan idiinka keeni dhuxul daba inaad kulaashaan.

فَلَمَّا جَآءَهَا نُودِىَ أَنۢ بُورِكَ مَن فِى ٱلنَّارِ وَمَنْ حَوْلَهَا وَسُبْحَـٰنَ ٱللَّهِ رَبِّ ٱلْعَـٰلَمِينَ ﴿٨﴾

8. Markuu yimid waxaa loogu dhawaaqay waa la barakeeyey cidda dabka la joogta iyo kuwa gaararkiisa ah, waxaana nasahan Rabbiga caalamka.

يَـٰمُوسَىٰٓ إِنَّهُۥٓ أَنَا ٱللَّهُ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿٩﴾

9. Muusow anugu waxaan ahay Ilaaha adkaada ee falka san.

وَأَلْقِ عَصَاكَ ۚ فَلَمَّا رَءَاهَا تَهْتَزُّ كَأَنَّهَا جَآنٌّ وَلَّىٰ مُدْبِرًا وَلَمْ يُعَقِّبْ ۚ يَـٰمُوسَىٰ لَا تَخَفْ إِنِّى لَا يَخَافُ لَدَىَّ ٱلْمُرْسَلُونَ ﴿١٠﴾

10. Ee tuur ushaada, markuu arkay iyadoo gilgilan (oo si degdega u dhaqdhaqaaqaysa) sida maska ayuu jeedsaday isagoo carari, mana so o noqon, Muusow ha cabsanin, kuma cabsadaan agtayda rasuulladuye.

إِلَّا مَن ظَلَمَ ثُمَّ بَدَّلَ حُسْنًۢا بَعْدَ سُوٓءٍ فَإِنِّى غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١١﴾

11. Ciddiise dulmi fasha markaas wanaag ku baddasha xumaan ka dib anugu waxaan ahay dambi dhaafe naxariista.

Qisada Nabi Muuse iyo sida Ilaaheen ula hadlay meelo badan yaa lagu sheegay, waxayna ku tusin in Ilaahay cidduu doono oo rasuulladiisii ka mid ahaa la hadli jiray, tan kale waxay ku tusin in Nabiyada aanay ceeb ku ahayn cabsida caadiga ah, wax sharaftooda wax u dhimana ayna ahayn. Tan kale waxay ku tusin awoodda Alle iyo inuu wuxuu doono fali karo. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Ilaahay ma

seexdo kumana habboona (waa ka dheer yahay) inuu seexdo, wuxuu hoos u dhigaa ama koryeelaa (qaybta) waxaa u kor noqda xaggiisa camalka habeenka maalinta ka hor, iyo kan maalinta habeenka ka hor. Waxaa wariyey Muslim. **[An-Naml: 7-11].**

وَأَدْخِلْ يَدَكَ فِى جَيْبِكَ تَخْرُجْ بَيْضَآءَ مِنْ غَيْرِ سُوٓءٍ ۖ فِى تِسْعِ ءَايَـٰتٍ إِلَىٰ فِرْعَوْنَ وَقَوْمِهِۦٓ ۚ إِنَّهُمْ كَانُوا۟ قَوْمًا فَـٰسِقِينَ ﴿١٢﴾

12. Gali gacantaada jeebkaaga waxay soo bixi iyadoo cad xumaan la'aan, (waxayna ka mid yihiin) sagaal calaamo oo fircoon iyo qoomkiisa loo muujiyey, waxayna ahaayeen qoom faasiqiina.

فَلَمَّا جَآءَتْهُمْ ءَايَـٰتُنَا مُبْصِرَةً قَالُوا۟ هَـٰذَا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿١٣﴾

13. Markay u timid calaamaddannadii iyadoo cad waxay dheheen kani waa sixir cad.

وَجَحَدُوا۟ بِهَا وَٱسْتَيْقَنَتْهَآ أَنفُسُهُمْ ظُلْمًا وَعُلُوًّا ۚ فَٱنظُرْ كَيْفَ كَانَ عَـٰقِبَةُ ٱلْمُفْسِدِينَ ﴿١٤﴾

14. Wayna diideen iyagooy yaqiinsatay naftoodu dulmi iyo isla sarreyn darteed, ee day siday ahaatay cidhibtii mufsidiinta (xumo wadayaasha).

Mucjisooyinka iyo calaamadaha la siiyey Nabi Muuse waxay ahaayeen sagaal oy ka mid ahaayeen usha iyo gacantu siday suurad kale sheegtay. Si Fircoon iyo qoomkiisa falka xumaa loogu wax tuso, wayse beeniyeen xaqii iyagoo hoosta ka og runta, si ay madaxnimada iyo isla waynida ugu mitidaan, maxaase ka dambeeyey oon halaag iyo khasaare ahayn, wax badanna waxaa la soo sheegay in dad badan ay diideen xaqa iyagoo garan ilaalin iyo dhawrid maslaxo gaara, taasoo ah madaxtinimo, xoolo, iyo isla wayni micno darro. Ciddii caqli lehna waa xaal ay waajib tahay inuu ku waano qaato. **[An-Naml: 12-14].**

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا دَاوُۥدَ وَسُلَيْمَـٰنَ عِلْمًا ۖ وَقَالَا ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ ٱلَّذِى فَضَّلَنَا عَلَىٰ كَثِيرٍ مِّنْ عِبَادِهِ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٥﴾

15. Waxaan siinnay Daawuud iyo Sulaymaan cilmi, waxayna dheheen mahad Ilaah baa iska leh ee ah kan naga fadilay wax badan oo addoommadiisa mu'miniinta ah.

وَوَرِثَ سُلَيْمَٰنُ دَاوُۥدَ ۖ وَقَالَ يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ عُلِّمْنَا مَنطِقَ ٱلطَّيْرِ وَأُوتِينَا مِن كُلِّ شَىْءٍ ۖ إِنَّ هَٰذَا لَهُوَ ٱلْفَضْلُ ٱلْمُبِينُ ﴿١٦﴾

16. Wuxuuna dhaxlay Sulaymaan Daawuud, wuxuuna yidhi dadow waxaa nala baray codka shimbiraha, waxaana nala siiyey wax kasta (oo xukun ah) kaasina waa fadliga cad.

وَحُشِرَ لِسُلَيْمَٰنَ جُنُودُهُۥ مِنَ ٱلْجِنِّ وَٱلْإِنسِ وَٱلطَّيْرِ فَهُمْ يُوزَعُونَ ﴿١٧﴾

17. Waxaa loo kulmiyey Sulaymaan junuudiisii oo jinni, insi iyo shimbiro leh, iyadoo la celcelin.

حَتَّىٰٓ إِذَآ أَتَوْا۟ عَلَىٰ وَادِ ٱلنَّمْلِ قَالَتْ نَمْلَةٌ يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّمْلُ ٱدْخُلُوا۟ مَسَٰكِنَكُمْ لَا يَحْطِمَنَّكُمْ سُلَيْمَٰنُ وَجُنُودُهُۥ وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ ﴿١٨﴾

18. Markay yimaaddeen toggii qudhaanjadana oy tidhi qudhaanjo qudhaanjooy gala guryihiinna yeyna idin jajabin Sulaymaan iyo ciidankiisu iyagoon idin ogayn.

فَتَبَسَّمَ ضَاحِكًا مِّن قَوْلِهَا وَقَالَ رَبِّ أَوْزِعْنِىٓ أَنْ أَشْكُرَ نِعْمَتَكَ ٱلَّتِىٓ أَنْعَمْتَ عَلَىَّ وَعَلَىٰ وَٰلِدَىَّ وَأَنْ أَعْمَلَ صَٰلِحًا تَرْضَىٰهُ وَأَدْخِلْنِى بِرَحْمَتِكَ فِى عِبَادِكَ ٱلصَّٰلِحِينَ ﴿١٩﴾

19. Markaasuu muusooday isagoo ku qosli hadalkeeda wuxuuna yidhi Allow i waafaji inaan ku mahdiyo nicmadaad ugu nicmaysay ani iyo waalidkay iyo inaan falo wanaag aad ka raalli tahay, ina gali naxariistaada addoommadaada suubban dhexdooda.

Wuxuu Alle sheegi wuxuu ugu nicmeeyey Nabi Daawuud iyo wiilkiisii Nabi Sulaymaan oo nicmooyin ah adduun iyo aakhiroba, iyo in Nabi Sulaymaan loo sakhiray jinni, insi iyo shimbirahaba, barayna hadalka shimbiraha intuu ka kaso afkooda, sidoo kale codka qudhaanjadii uga digtay saaxiibadeed jajabinta Nabi Sulaymaan iyo colkiisoon ogayn.

Uuna qoslay kuna mahdiyey Alle, warsadayna wanaag isaga iyo waalidiintiis, waana kaas wanaaggu in marka Alle khayr ku siiyo lagu mahadiyo, wanaagna la falo, xumaanta iyo kibirkana layska jiro oo laga fogaado. **[An-Naml: 15-19].**

وَتَفَقَّدَ ٱلطَّيْرَ فَقَالَ مَالِىَ لَآ أَرَى ٱلْهُدْهُدَ أَمْ كَانَ مِنَ ٱلْغَآئِبِينَ ﴿٢٠﴾

20. Wuxuu fiirfiiriyey shimbirihii (Sulaymaan) wuxuuna yidhi maxaan la arki la'ahay hud-hudkii

mise kuwa maqan buu ka mid yahay.

21. Waxaan cadaabi cadaab daran ama waan gawrici ama wuxuu ii keeni xujo cad.

22. Markaasuu muddo yar maqnaa markaasuu yidhi (markuu yimid): waxaan ogaaday waxaadan ogaannin, waxaana kaaga keenay reer Saba' war yaqiina.

23. Waxaan helay haweeney xukumaysa lana siiyey wax kasta (oo xukun ubaahan yahay) waxayna leedahay carshi wayn.

24. Waxaan helay iyada iyo qoomkeedii oo u sujuudi qorraxda Alle ka sokow wuxuuna u qurxiyey shaydaan camalkooda wuxuuna ka leexiyey jidka kumana hanuunaan.

25. Inay u sujuudaan ilaaha soo bixiya waxa ku qarsoon samooyinka iyo dhulka oo og waxaad qarinaysaan iyo waxaad muujinaysaan.

26. Ilaahay isaga mooyee ilaah kale oo xaq lugu caabudo ma jiro, waana Rabbiga carshiga wayn.

لَأُعَذِّبَنَّهُۥ عَذَابًا شَدِيدًا أَوْ لَأَاْذْبَحَنَّهُۥٓ أَوْ لَيَأْتِيَنِّى بِسُلْطَٰنٍ مُّبِينٍ ﴿٢١﴾

فَمَكَثَ غَيْرَ بَعِيدٍ فَقَالَ أَحَطتُ بِمَا لَمْ تُحِطْ بِهِۦ وَجِئْتُكَ مِن سَبَإٍۭ بِنَبَإٍ يَقِينٍ ﴿٢٢﴾

إِنِّى وَجَدتُّ ٱمْرَأَةً تَمْلِكُهُمْ وَأُوتِيَتْ مِن كُلِّ شَىْءٍ وَلَهَا عَرْشٌ عَظِيمٌ ﴿٢٣﴾

وَجَدتُّهَا وَقَوْمَهَا يَسْجُدُونَ لِلشَّمْسِ مِن دُونِ ٱللَّهِ وَزَيَّنَ لَهُمُ ٱلشَّيْطَٰنُ أَعْمَٰلَهُمْ فَصَدَّهُمْ عَنِ ٱلسَّبِيلِ فَهُمْ لَا يَهْتَدُونَ ﴿٢٤﴾

أَلَّا يَسْجُدُوا۟ لِلَّهِ ٱلَّذِى يُخْرِجُ ٱلْخَبْءَ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَيَعْلَمُ مَا تُخْفُونَ وَمَا تُعْلِنُونَ ﴿٢٥﴾

ٱللَّهُ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ رَبُّ ٱلْعَرْشِ ٱلْعَظِيمِ ﴿٢٦﴾

Awoodda Alle ayaa iska leh, ha siiyo Nabi Sulaymaan xukun laakiin waxaa ka qarsoomi kara wax xayawaan yari ogaan karo sida hud-hudka, kaasoo uga warramay reer Saba' iyo xukunkooda iyo waxay caabudaan, taasina la yaab malaha mar hadday wax walba ku xidhan yihiin awoodda Allaha wax walba koobay, ee isaga uun Ilaah ah, ee carshiga wayn leh, shaydaan baase dad dhumiyey oo u harag lulay oo xumaanta u qurxiyey, waana colka dadka

oon marna ka nasanayn dhumintooda. Tan kale waxay ku tusin wanaagga makhluuqa qaarkiis sida hud-hudkaas Alle iyo cibaadadiisa u yeedhay, saas darteed yuu Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) u reebay dilidda qudhaanjada, shinnida, hud-hudka iyo suradka. Waxaa wariyey (Imaam Axmed, Abuu Daawuud, Ibnu Maajah). **[An-Naml: 20-26].**

27. Wuxuuna yidhi waannu eegi inaad run sheegi iyo inaad ka mid tahay beenaalayaasha.

* قَالَ سَنَنظُرُ أَصَدَقْتَ أَمْ كُنتَ مِنَ ٱلْكَٰذِبِينَ ﴿٢٧﴾

28. La tag warqaddaydan kuna tuur xaggooda kana durug xaggooda, markaas fiiri waxay soo celiyaan.

ٱذْهَب بِّكِتَٰبِى هَٰذَا فَأَلْقِهْ إِلَيْهِمْ ثُمَّ تَوَلَّ عَنْهُمْ فَٱنظُرْ مَاذَا يَرْجِعُونَ ﴿٢٨﴾

29. Waxayna tidhi: madaxeey waxaa la ii soo tuuray warqad sharaf leh.

قَالَتْ يَٰٓأَيُّهَا ٱلْمَلَؤُا۟ إِنِّىٓ أُلْقِىَ إِلَىَّ كِتَٰبٌ كَرِيمٌ ﴿٢٩﴾

30. (Kuna qoran) waxay ka timid Sulaymaan waxayna ku billabatay magaca Allaha naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

إِنَّهُۥ مِن سُلَيْمَٰنَ وَإِنَّهُۥ بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ ﴿٣٠﴾

31. Ee hayska kay waynaynina iina imaadda idinkoo muslimiina.

أَلَّا تَعْلُوا۟ عَلَىَّ وَأْتُونِى مُسْلِمِينَ ﴿٣١﴾

32. Waxayna tidhi madaxeey ii ishaara amarkayga ma ihi mid goysa amar intaad ka joogtaan.

قَالَتْ يَٰٓأَيُّهَا ٱلْمَلَؤُا۟ أَفْتُونِى فِىٓ أَمْرِى مَا كُنتُ قَاطِعَةً أَمْرًا حَتَّىٰ تَشْهَدُونِ ﴿٣٢﴾

33. Waxayna dhaheen annagu waxaan nahay kuwo xoog badan oo geesinnimo badan, amarkase adaa leh ee fiiri waxaad fari.

قَالُوا۟ نَحْنُ أُو۟لُوا۟ قُوَّةٍ وَأُو۟لُوا۟ بَأْسٍ شَدِيدٍ وَٱلْأَمْرُ إِلَيْكِ فَٱنظُرِى مَاذَا تَأْمُرِينَ ﴿٣٣﴾

34. Waxay tidhi xaakimyadu hadday magaalo ku galaan (xoog) way fasaadiyaan waxayna ka yeelaan ehelkeeda sharafta leh kuwo dullaysan, saasayna falaan.

قَالَتْ إِنَّ ٱلْمُلُوكَ إِذَا دَخَلُوا۟ قَرْيَةً أَفْسَدُوهَا وَجَعَلُوٓا۟ أَعِزَّةَ أَهْلِهَآ أَذِلَّةً ۖ وَكَذَٰلِكَ يَفْعَلُونَ ﴿٣٤﴾

35. Waxaanse u diri hadyad waxaana eegi waxay la soo noqdaan kuwa la diray.

وَإِنِّي مُرْسِلَةٌ إِلَيْهِم بِهَدِيَّةٍ فَنَاظِرَةٌۢ بِمَ يَرْجِعُ ٱلْمُرْسَلُونَ ﴿٣٥﴾

Markay u tagtay warqadduu waday hud-hud oo faraysay islaannimo, yey la tashatay haweenaydii madaxdeedii, markayse ismuujiyeen inay xoog leeyihiin yey iyadu u soo jeedisay dagaal la'aan inay hadyad u dirto eegtana jawaabta, waxayna ahayd haweenay caqli badan oo waayo arag ah. Qataade wuxuu yidhi: yaa ka caqli badan islaannimadeedii iyo gaalimadeediiba. Maxayse tari isla wayni iyo kibir iyo dagaal jacayl, waxba, waxaase fiican kaadsiinyo, xaq raacid iyo islaannimo iyo in xaqa loo yeedho had iyo jeer. **[An-Naml: 27-35].**

36. Markay soo gaadhay hadyaddii (Nabi) Sulaymaan yuu yidhi ma waxaad ii kordhinaysaan xoolo, wuxuu i siiyey Alle yaa ka khayr roon wuxuu idin siiyey, idinkaase ku farxi hadya diinna.

فَلَمَّا جَآءَ سُلَيْمَٰنَ قَالَ أَتُمِدُّونَنِ بِمَالٍ فَمَآ ءَاتَىٰنِۦَ ٱللَّهُ خَيْرٌ مِّمَّآ ءَاتَىٰكُم ۚ بَلْ أَنتُم بِهَدِيَّتِكُمْ تَفْرَحُونَ ﴿٣٦﴾

37. Ee u celi (haddiyaddeeddii) waxaanna ula imaanaynaa junuud (col) ayna awoodayn waxaanna ka bixinaynaa magaalada iyagoo dullaysan oo ihaanaysan.

ٱرْجِعْ إِلَيْهِمْ فَلَنَأْتِيَنَّهُم بِجُنُودٍ لَّا قِبَلَ لَهُم بِهَا وَلَنُخْرِجَنَّهُم مِّنْهَآ أَذِلَّةً وَهُمْ صَٰغِرُونَ ﴿٣٧﴾

38. Wuxuuna yidhi qoomow yaa ii keena carshigeeda (kursigeeda) ka hor imaatinkooda iyagoo hoggaansan.

قَالَ يَٰٓأَيُّهَا ٱلْمَلَؤُا۟ أَيُّكُمْ يَأْتِينِى بِعَرْشِهَا قَبْلَ أَن يَأْتُونِى مُسْلِمِينَ ﴿٣٨﴾

39. Wuxuuna yidhi mid xoog badan oo jin ah anaa kuu keeni intaadan ka kicin fadhigaada, waxaana ahay xoog badane aamina.

قَالَ عِفْرِيتٌ مِّنَ ٱلْجِنِّ أَنَا۠ ءَاتِيكَ بِهِۦ قَبْلَ أَن تَقُومَ مِن مَّقَامِكَ ۖ وَإِنِّى عَلَيْهِ لَقَوِىٌّ أَمِينٌ ﴿٣٩﴾

40. Wuxuuse yidhi kay agtiisa ahayd ogaanshaha kitaabka anaa kuu keeni ishaada laabideeda

قَالَ ٱلَّذِى عِندَهُۥ عِلْمٌ مِّنَ ٱلْكِتَٰبِ أَنَا۠ ءَاتِيكَ بِهِۦ قَبْلَ أَن يَرْتَدَّ إِلَيْكَ طَرْفُكَ ۚ

horteed (ilbidhiqsi), markuu ku arkay agtiisa isagoo ku sugan wuxuu yidhi kani waa fadliga Rabbigay inuu i imtixaamo inaan ku mahdiyo iyo inaan ka gaaloobo, ciddii ku mahadisa wuxuu uun u mahdiyey nafitiisa ciddii gaalowdana Rabbigay waa ka kaaftoon yahay waana sharaf badan yahay.

فَلَمَّا رَءَاهُ مُسْتَقِرًّا عِندَهُۥ قَالَ هَٰذَا مِن فَضْلِ رَبِّي لِيَبْلُوَنِيٓ ءَأَشْكُرُ أَمْ أَكْفُرُ ۖ وَمَن شَكَرَ فَإِنَّمَا يَشْكُرُ لِنَفْسِهِۦ ۖ وَمَن كَفَرَ فَإِنَّ رَبِّي غَنِيٌّ كَرِيمٌ ﴿٤٠﴾

Wuu diiday Nabi Sulaymaan hadyadii, wuxuuna ugu goodiyey inuu ku duulo, wuxuuna ka codsaday colkiisa in loo keeno kursigeedii ka hor imaatinkeeda iyadoo hoggaansan, mid xoog badan yaana yaboohay inuu keeno intuusan fadhiga ka kicin, waxaase ka dhakhso badnaaday kan ku keeni ilbidhiqsi, markii loo keenay kursigana wuxuu ku mahadiyey Alle, uuna yaqiinsaday inay imtixaan tahay inuu ku mahadiyo iyo in kale. Waana taas akhlaaqda dadka wanaagsan oo ah inay ogyhiin in nicmadu imtixaan tahay in la mahadiyo iyo in kale, oyna ahayn faan, isla wayni iyo durbaan tun. Mahadda Ilaahay iyo ku xidhnaantiisana waa hubka mu'miniinta. Diidda iyo isla waynidana waa caadada gaalada. **[An-Naml: 36-40].**

قَالَ نَكِّرُوا۟ لَهَا عَرْشَهَا نَنظُرْ أَتَهْتَدِىٓ أَمْ تَكُونُ مِنَ ٱلَّذِينَ لَا يَهْتَدُونَ ﴿٤١﴾

41. Wuxuuna yidhi dooriya kursigeeda inay garato iyo inay noqoto cidaan garanayn.

فَلَمَّا جَآءَتْ قِيلَ أَهَٰكَذَا عَرْشُكِ ۖ قَالَتْ كَأَنَّهُۥ هُوَ ۚ وَأُوتِينَا ٱلْعِلْمَ مِن قَبْلِهَا وَكُنَّا مُسْلِمِينَ ﴿٤٢﴾

42. Markay timid waxaa lagu yidhi ma sidanaa kursigaagu, waxayna tidhi waxaad mooddaa isagii (wuxuuna yidhi) waxaa nala siiyey horteed cilmi waxaanna nahay muslimiin.

وَصَدَّهَا مَا كَانَت تَّعْبُدُ مِن دُونِ ٱللَّهِ ۖ إِنَّهَا كَانَتْ مِن قَوْمٍ كَٰفِرِينَ ﴿٤٣﴾

43. Waxaana (xaqa) ka reebay waxay caabudaysay oo Alle ka soo hadhay, waxayna ka mid ahayd qoom gaala ah.

قِيلَ لَهَا ٱدْخُلِى ٱلصَّرْحَ ۖ فَلَمَّا رَأَتْهُ

44. Waxaa lagu yidhi gal daarta markay aragtayna waxay

حَسِبَتْهُ لُجَّةً وَكَشَفَتْ عَن سَاقَيْهَا ۚ قَالَ إِنَّهُۥ صَرْحٌ مُّمَرَّدٌ مِّن قَوَارِيرَ ۗ قَالَتْ رَبِّ إِنِّى ظَلَمْتُ نَفْسِى وَأَسْلَمْتُ مَعَ سُلَيْمَٰنَ لِلَّهِ رَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٤٤﴾

u malaysay mawjad (biya ah) waxayna ka faydatay dhudhumadeeda, wuxuuna ku yidhi waa daar salaax sugan oo quruurado ah, waxayna tidhi Allow anigu waxaan dulmiyey naftayda, waxaana u islaamay Ilaahay ee Rabbiga caalamka ah la jirka Sulaymaan.

Markii loo keenay kursigeedii yuu faray Nabi Sulaymaan in la dooriyo tilmaamihiisa qaarkood inuu imtixaamo inay garato keedii inuu yahay iyo in kale, markayse timid oo la warsaday inuu keedii yahay waxay sheegtay in isagii la moodo, waxaana xaqa u diidanaa waxay caabudaysay ee ilaahay ka soo hadhay, oy kuna dhexnoolayd qoom gaalo ah, markii la soo dhaweeyey oy aragtay daar lala yaabo iyo xukunka Alle siiyey Nabi Sulaymaan yey qirtay islaamka ooy u hoggaansantay Ilaaha caalamka. Taasina waxay ku tusin in madaxda muslimiinta laga rabo inay dadka xaqa ugu yeedhaan siduu falay Nabi Sulaymaan, oo fali jiray Nabigeennii Muxamad ahaa (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) sidoo kale waxaa loo baahan yahay in xaqa la raaco si kastoos yahay iyo hawl kastoos hayo, iyo wax kastoos yahay, illeen xaqaa horreeyey, mudanna in la raaco, oo la rumeeyo. **[An-Naml: 41-44].**

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَآ إِلَىٰ ثَمُودَ أَخَاهُمْ صَٰلِحًا أَنِ ٱعْبُدُوا۟ ٱللَّهَ فَإِذَا هُمْ فَرِيقَانِ يَخْتَصِمُونَ ﴿٤٥﴾

45. Waxaan u dirray reer thamuud walaalkood saalax inay Alle caabudaan markaasay soo bexeen iyagoo labo kooxooda oo doodi.

قَالَ يَٰقَوْمِ لِمَ تَسْتَعْجِلُونَ بِٱلسَّيِّئَةِ قَبْلَ ٱلْحَسَنَةِ ۖ لَوْلَا تَسْتَغْفِرُونَ ٱللَّهَ لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ ﴿٤٦﴾

46. Wuxuuna yidhi qoomkayow maxaad u dedejisanaysaan xumaan wanaag ka hor, maadse dambi dhaaf warsataan Alle inuu idiin naxariisto.

قَالُوا۟ ٱطَّيَّرْنَا بِكَ وَبِمَن مَّعَكَ ۚ قَالَ طَٰٓئِرُكُمْ عِندَ ٱللَّهِ ۖ بَلْ أَنتُمْ قَوْمٌ تُفْتَنُونَ ﴿٤٧﴾

47. Waxayna dheheen waan ku baasaysannay adiga iyo inta kula jirta, wuxuuna ku yidhi baaskiinnu wuxuu jiraa Alle agtiisa, waxaadse tihiin qoom la fidneeyey.

48. Waxaana magaalada ku sugnaa sagaal qof oo fasaadin dhulka, hagaajinayna.

وَكَانَ فِي ٱلْمَدِينَةِ تِسْعَةُ رَهْطٍ يُفْسِدُونَ فِي ٱلْأَرْضِ وَلَا يُصْلِحُونَ ﴿٤٨﴾

49. Waxayna dheheen isku dhaarta Alle inaan mirro isaga iyo ehelkiisaba markaas aan ku dhahno qaraabadiisa maannaan joogin meeshuu ku halaagmay ehelkiisu waxaanna sheegaynaa run.

قَالُوا۟ تَقَاسَمُوا۟ بِٱللَّهِ لَنُبَيِّتَنَّهُۥ وَأَهْلَهُۥ ثُمَّ لَنَقُولَنَّ لِوَلِيِّهِۦ مَا شَهِدْنَا مَهْلِكَ أَهْلِهِۦ وَإِنَّا لَصَٰدِقُونَ ﴿٤٩﴾

Qisada reer Thamuud wax badan buu quraanku ka warramay waxayse aayadahani sheegeen inay qaybsameen, sharaysteenna Nabigii iyo intii la jirtay, oyna magaaladaas ku noolaayeen sagaal qof oo qasayaal dhagarta iyo xumaanta maleega, waxayna isku dhaarsadeen inay dilaan Saalax iyo ehelkiisa goor habeena uguna dhaartaan dadkiisa inay joogin meeshii lagu dilay. Taasina waxay ku tusin dhibaatada iyo balaayada inay u horseedaan had iyo jeer, oyna waajib tahay in laga digtoonaado xumaan wadayaasha, maxayse ku dambeeyeen, waa waxay aayadaha soo socda inooga warrami. **[An-Naml: 45-49].**

50. Way dhagreen dhagar annana waan dhagarnay iyagoon ogayn.

وَمَكَرُوا۟ مَكْرًا وَمَكَرْنَا مَكْرًا وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ ﴿٥٠﴾

51. Ee day siday noqotay cidhibtii dhagartooda iyo halaaggii halaagnay iyagii iyo qoomkoodiiba dhammaan.

فَٱنظُرْ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ مَكْرِهِمْ أَنَّا دَمَّرْنَٰهُمْ وَقَوْمَهُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٥١﴾

52. Taasina waa guryaahoodii oo cidla ah dulankoodii dartiis, arrintaasna calaamad yaa ugu sugan qoomkii wax ogaan.

فَتِلْكَ بُيُوتُهُمْ خَاوِيَةًۢ بِمَا ظَلَمُوٓا۟ ۗ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَءَايَةً لِّقَوْمٍ يَعْلَمُونَ ﴿٥٢﴾

53. Waxaanna korinnay kuwii rumeeyey oo dhawrsanayey.

وَأَنجَيْنَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَكَانُوا۟ يَتَّقُونَ ﴿٥٣﴾

Xumaan bay ka shaqeeyeen wayna la rogmatay oo waxaa ku dhacay halaag iyo khasaare, waxaana cidloobay guryahoodii dulankoodii dartiis, waana arrin ay ku waano iyo wacdi qaadato ciddii wax kasi, waxaana la koriyey Saalax

iyo qoomkiisii xaqa ku taagnaa, taasina waa sunnada iyo caadada Alle inuu halaago daalimiinta, koriyana mu'miniinta, laga yaabaa in dulmigu muddo joogo laakiin ma waaro, saas darteed yey waajib tahay in lagu waano qaato qisooyinka quraanka ee la soo celceliyey wax badan. **[An-Naml: 50-53].**

وَلُوطًا إِذْ قَالَ لِقَوْمِهِۦٓ أَتَأْتُونَ ٱلْفَٰحِشَةَ وَأَنتُمْ تُبْصِرُونَ ﴿٥٤﴾

54. (Nabi) Luudh (xusuuso) markuu ku yidhi qoomkiisii ma waxaad la imanaysaan xumaan idinkoo arko.

أَئِنَّكُمْ لَتَأْتُونَ ٱلرِّجَالَ شَهْوَةً مِّن دُونِ ٱلنِّسَآءِۚ بَلْ أَنتُمْ قَوْمٌ تَجْهَلُونَ ﴿٥٥﴾

55. Idinku ma raggaad u tagaysaan doonid darteed haweenka ka sokow waxaadse tihiin qoom jaahiliina.

* فَمَا كَانَ جَوَابَ قَوْمِهِۦٓ إِلَّآ أَن قَالُوٓا۟ أَخْرِجُوٓا۟ ءَالَ لُوطٍ مِّن قَرْيَتِكُمْۖ إِنَّهُمْ أُنَاسٌ يَتَطَهَّرُونَ ﴿٥٦﴾

56. Mana noqonnin jawaabtii qoomkiisa waxaan ahayn ka bixiya Luudh iyo ehelkiisa magaaladiinna waa dad isdaahirine.

فَأَنجَيْنَٰهُ وَأَهْلَهُۥٓ إِلَّا ٱمْرَأَتَهُۥ قَدَّرْنَٰهَا مِنَ ٱلْغَٰبِرِينَ ﴿٥٧﴾

57. Waana korinnay isagii iyo ehelkiisii haweenaydiisii mooyee, waxaan ku qaddarray (ka dhignay) kuwa halaagsami.

وَأَمْطَرْنَا عَلَيْهِم مَّطَرًاۖ فَسَآءَ مَطَرُ ٱلْمُنذَرِينَ ﴿٥٨﴾

58. Waxaana ku soo daadinnay korkooda roob (dhagax naara) waxaana xumaaday roobka kuwa loo digay.

Qoomkii Nabi Luudh waxay ku magac bixiyeen inay ragga wax ka dayan jireen intay haween guursan lahaayeen, taasina waa arrin ceeb ku ah binii Aadamka, kuna tusin jaahilnimo iyo fasaad intay ka eryaan Nabi Luudh iyo intii rumaysay iyagoo ku caayi inay nadiif yihiin, waxaase la yaab ah inay nadiifi ceeb ku ahayd qoomkaa agtooda kuna tahay had iyo jeer kuwa xun xun, Alle se waa koriyey Luudh iyo mu'miniinta, oo halaagay gaaladii oo haweeneydiisii ku jirto, waana wax lagu waano qaato. **[An-Naml: 54-58].**

قُلِ ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ وَسَلَٰمٌ عَلَىٰ عِبَادِهِ ٱلَّذِينَ ٱصْطَفَىٰٓۗ ءَآللَّهُ خَيْرٌ أَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿٥٩﴾

59. Waxaad dhahdaa mahad Alle ayaa iska leh nabadgalyana ha ahaato addoommadiis uu

doortay korkooda, ma Alle ayaa khayr roon mise waxay la wadaajin.

60. Ma Allaha abuuray samooyinka iya dhulka oo idiinka soo dejiyey samada biyo oon ku soo bixinnay beero qurux badan (miyaa khayr roon mise waxaad caabudaysaan) ma kari kartaan inaad soo bixisaan geedkeeda, ma ilaah kalaa jira Alle miciis, waase qoom (xaqa) ka leexaan.

أَمَّنْ خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ وَأَنزَلَ لَكُم مِّنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَأَنۢبَتْنَا بِهِۦ حَدَآئِقَ ذَاتَ بَهْجَةٍ مَّا كَانَ لَكُمْ أَن تُنۢبِتُوا۟ شَجَرَهَآ ۗ أَءِلَٰهٌ مَّعَ ٱللَّهِ ۚ بَلْ هُمْ قَوْمٌ يَعْدِلُونَ ﴿٦٠﴾

61. Mise (waxaa khayr roon) Allaha ka yeelay dhulka sugnaan, oo u yeelay wabiyo, buuro, oo u yeelay badaha dhexdooda soohdin, ma ilaah kalaa jira Alle miciisa, badankooduse wax ma oga.

أَمَّن جَعَلَ ٱلْأَرْضَ قَرَارًا وَجَعَلَ خِلَٰلَهَآ أَنْهَٰرًا وَجَعَلَ لَهَا رَوَٰسِىَ وَجَعَلَ بَيْنَ ٱلْبَحْرَيْنِ حَاجِزًا ۗ أَءِلَٰهٌ مَّعَ ٱللَّهِ ۚ بَلْ أَكْثَرُهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٦١﴾

Wuxuu Alle faray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu yidhaahdo: mahad Alle ayaa iska leh, nabadgalyona ha ahaato addoommada Alle doortay korkooda, taasoo ah inay xumaan iyo qas ka nabadgalaan, tan kale waxaa wanaag badan Allaha abuuray cirka iyo dhulka oo roobka keena kuna soo bixiya doog iyo beero aan cid kale soo bixin karin, oo dhulka ka yeelay meel lagu sugnaado, yeelayna dhexdiisa wabiyo iyo buuro, badahana kala dhawra, isagaana ah Ilaaha xaqa, wax la mid ah ama mudan in lala caabudana ma jiro, wuxuuna mudan yahay waynayn iyo caabudid. **[An-Naml: 59-61].**

62. Mise Allaha aqbala ka dhibban markuu baryo oo fayda xumaanta (dhibka) idinkana yeeli kuwa dhulka u hadhi (iska baddala), ma ilaah kalaa jira Alle miciisa, yaraa intaad wax xusuusanaysaan.

أَمَّن يُجِيبُ ٱلْمُضْطَرَّ إِذَا دَعَاهُ وَيَكْشِفُ ٱلسُّوٓءَ وَيَجْعَلُكُمْ خُلَفَآءَ ٱلْأَرْضِ ۗ أَءِلَٰهٌ مَّعَ ٱللَّهِ ۚ قَلِيلًا مَّا تَذَكَّرُونَ ﴿٦٢﴾

63. Mise Allaha idin toosiya mugdiyada barriga (dhulka) iyo

أَمَّن يَهْدِيكُمْ فِى ظُلُمَٰتِ ٱلْبَرِّ وَٱلْبَحْرِ

badda dhexdeeda, oo ah kan dira dabaylaha oo bishaarayn naxariista Alle (roobka) hortiisa, ma ilaah kalaa jira Alle miciisa, Alle ayaa ka sarreeya waxay la wadaajin.

وَمَن يُرۡسِلُ ٱلرِّيَٰحَ بُشۡرَۢا بَيۡنَ يَدَيۡ رَحۡمَتِهِۦٓۗ أَءِلَٰهٞ مَّعَ ٱللَّهِۚ تَعَٰلَى ٱللَّهُ عَمَّا يُشۡرِكُونَ ٦٣

64. Mise Allaha billaaba khalqiga (abuurkiisa) haddana soo celin, oo ah kan idinka arzaaqa samada iyo dhulkaba, ma ilaah (kalaa) jira Alle miciisa, waxaad dhahdaa keena xujadiinna haddaad run sheegaysaan.

أَمَّن يَبۡدَؤُاْ ٱلۡخَلۡقَ ثُمَّ يُعِيدُهُۥ وَمَن يَرۡزُقُكُم مِّنَ ٱلسَّمَآءِ وَٱلۡأَرۡضِۗ أَءِلَٰهٞ مَّعَ ٱللَّهِۚ قُلۡ هَاتُواْ بُرۡهَٰنَكُمۡ إِن كُنتُمۡ صَٰدِقِينَ ٦٤

Ilaahay baa ajiiba kan dhibban dadkana kala badala in la xusana mudan, sidoo kale isagaa dadka ku toosiya mugdiyada dhexdooda, mudanna inaan cid kale lala caabudin. Billaabana abuuridda, soona celiya dadka, arzaaqana dadka.

Nabigana (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi markii la warsaday maxaad u yeedhi: waxaan u yeedhi Allaha hadduu ku taabto dhib ood barido kaa fayda, kan baadida kuu soo celiya, kan abaartu markay ku hesho kaa bixiya. Waxaa wariyey (Imaam Axmed). Saasay xaq u tahay in lagu dhaqmo sharcigiisa, loona hoggaansamo. **[An-Naml: 62-64].**

65. Waxaad dhahdaa ma oga waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan waxa maqan Alle mooyee, mana oga goorta la soo bixin.

قُل لَّا يَعۡلَمُ مَن فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ ٱلۡغَيۡبَ إِلَّا ٱللَّهُۚ وَمَا يَشۡعُرُونَ أَيَّانَ يُبۡعَثُونَ ٦٥

66. Mana gaadhin cilmigooda aakhiro (buuxsan), waxayse kaga sugan yihiin xaggeeda shaki, wayna ka indho la' yihiin xaggeeda.

بَلِ ٱدَّٰرَكَ عِلۡمُهُمۡ فِي ٱلۡأٓخِرَةِۖ بَلۡ هُمۡ فِي شَكّٖ مِّنۡهَاۖ بَلۡ هُم مِّنۡهَا عَمُونَ ٦٦

67. Waxay dheheen kuwii gaaloobay markaan noqonno carro annaga iyo aabbayaalkanno miyaa nala soo bixin.

وَقَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓاْ أَءِذَا كُنَّا تُرَٰبٗا وَءَابَآؤُنَآ أَئِنَّا لَمُخۡرَجُونَ ٦٧

لَقَدْ وُعِدْنَا هَٰذَا نَحْنُ وَءَابَآؤُنَا مِن قَبْلُ إِنْ هَٰذَآ إِلَّآ أَسَٰطِيرُ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿٦٨﴾

68. Waa naloo yaboohay kan (soo bixinta) annaga iyo aabayaalkanno mar hore, kanna ma aha waxaan warkii dadkii hore ahayn.

قُلْ سِيرُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ فَٱنظُرُوا۟ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلْمُجْرِمِينَ ﴿٦٩﴾

69. Waxaad dhahdaa ku socda dhulka oo daya siday noqotay cidhibtii dambiilayaasha.

وَلَا تَحْزَنْ عَلَيْهِمْ وَلَا تَكُن فِى ضَيْقٍ مِّمَّا يَمْكُرُونَ ﴿٧٠﴾

70. Hana u murgin korkooda, hana ka cidhiidhyamin waxay dhagri.

Wax maqan cid og oon Alle ahayn ma jiro, mar dadka la soo bixin cid og oon Ilaahay ahayna ma jiro, maxayse tari wax ogaan marka aakhiro la tago, adduunkay ku wanaagsan tahay inaad xaqa ogaatid, oodan ka indho la'aan, diididda soo bixinta, xaqiridda xaqa iyo cidda u yeedhina waa caadada gaalada xaq diidayaasha ah, hase socdeen dhulka oo ha ku waano qaateen siday noqotay cidhibtii dambiilayaasha.

Waxaana Alle faray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuusan ka murugoonnin cidhiidhina is galinnin, taasina waxay waano guud u tahay iyo wax ku qaadasho kuwa xaqa u yeedha goor kasta. **[An-Naml: 65-70].**

وَيَقُولُونَ مَتَىٰ هَٰذَا ٱلْوَعْدُ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٧١﴾

71. Waxayna odhan waa goorma yaboohaasi haddaad run sheegaysaan.

قُلْ عَسَىٰٓ أَن يَكُونَ رَدِفَ لَكُم بَعْضُ ٱلَّذِى تَسْتَعْجِلُونَ ﴿٧٢﴾

72. Waxaad dhahdaa waxaa suurowda inay dhawdahay waxaad dedejisanaysaan qaarkeed.

وَإِنَّ رَبَّكَ لَذُو فَضْلٍ عَلَى ٱلنَّاسِ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَشْكُرُونَ ﴿٧٣﴾

73. Rabbigaana waa fadli siiyaha dadka, laakiin badankoodu kuma mahdiyaan.

وَإِنَّ رَبَّكَ لَيَعْلَمُ مَا تُكِنُّ صُدُورُهُمْ وَمَا يُعْلِنُونَ ﴿٧٤﴾

74. Rabbigaana wuxuu og yahay waxay qarin laabahoodu iyo waxay muujin.

75. Waxa ku maqan samada iyo dhulkana waxay ku sugan yihiin kitaab cad.

وَمَا مِنْ غَآئِبَةٍ فِى ٱلسَّمَآءِ وَٱلْأَرْضِ إِلَّا فِى كِتَٰبٍ مُّبِينٍ ﴿٧٥﴾

76. Quraankanna wuxuu uga qisoon (warrami) banii israa'iil wixii badnaa ee ay isku khilaafeen.

إِنَّ هَٰذَا ٱلْقُرْءَانَ يَقُصُّ عَلَىٰ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ أَكْثَرَ ٱلَّذِى هُمْ فِيهِ يَخْتَلِفُونَ ﴿٧٦﴾

77. Quraankuna waa hanuun iyo naxariista mu'miniinta.

وَإِنَّهُۥ لَهُدًى وَرَحْمَةٌ لِّلْمُؤْمِنِينَ ﴿٧٧﴾

78. Rabbigaana wuxuu ku kala xukumi dhexdooda xukunkiisa, waana adkaade og.

إِنَّ رَبَّكَ يَقْضِى بَيْنَهُم بِحُكْمِهِۦ ۚ وَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْعَلِيمُ ﴿٧٨﴾

Gaaladu had iyo jeer waxay dedejistaan ciqaabta iyo qiyaamada, wax kastase waxay leeyihiin waqti iyo muddo, Alle na waa u nicmeeyaha dadka laakiin badankoodu kuma mahdiyaan, waana ogaha waxa laabta ku jira iyo waxa la muujinba. Cirka iyo dhulka waxa ku maqanna waxay ku sugan yihiin kitaab cad oo koobay. Quraankuna wax badan yuu ka warramay siday isu khilaafeen banii israa'iil, waana hanuunka iyo naxariista mu'miniinta, Rabbi ayaana kala xukumi dadka xukun caadil ah, isagoon wax la awood ahna jirin, wax kastana og. Oyna waajib tahay in loo noqdo, loo hoggaansamo, dhabna loo caabudo. **[An-Naml: 71-78].**

79. Ee talo saaro Alle, adugu waxaad ku sugan tahay xaq cade.

فَتَوَكَّلْ عَلَى ٱللَّهِ ۖ إِنَّكَ عَلَى ٱلْحَقِّ ٱلْمُبِينِ ﴿٧٩﴾

80. Adugu wax ma maqashiisid kuwa dhintay mana maqashiisid dhagoolaha (aan hadalka wanaagsan wax ku dheefin) dhawaaq markay jeedsadaan iyagoo sii socda.

إِنَّكَ لَا تُسْمِعُ ٱلْمَوْتَىٰ وَلَا تُسْمِعُ ٱلصُّمَّ ٱلدُّعَآءَ إِذَا وَلَّوْا۟ مُدْبِرِينَ ﴿٨٠﴾

81. Mana tihid mid ka toosin kara indhoolayaasha baadidooda, waxna ma maqashiin kartid ruux rumeeyey aayaadkannaga oo muslima mooyee.

وَمَآ أَنتَ بِهَٰدِى ٱلْعُمْىِ عَن ضَلَٰلَتِهِمْ ۖ إِن تُسْمِعُ إِلَّا مَن يُؤْمِنُ بِـَٔايَٰتِنَا فَهُم مُّسْلِمُونَ ﴿٨١﴾

82. Markuu ku dhaco korkooda qawlkii (ciqaabtii) waxaan u soo bixinnaa daabbaddii dhulka oo kula hadli dadka inay ahaayeen kuwaan yaqiinsanayn aayaadkannaga.

* وَإِذَا وَقَعَ ٱلْقَوْلُ عَلَيْهِمْ أَخْرَجْنَا لَهُمْ دَآبَّةً مِّنَ ٱلْأَرْضِ تُكَلِّمُهُمْ أَنَّ ٱلنَّاسَ كَانُوا۟ بِـَٔايَـٰتِنَا لَا يُوقِنُونَ ﴿٨٢﴾

83. Xusuuso maalintaan ka soo kulminayno ummad kasta koox ka mid ah kuwii beeniyey aayadkannaga iyagoo la isu celin oo la kaxayn.

وَيَوْمَ نَحْشُرُ مِن كُلِّ أُمَّةٍ فَوْجًا مِّمَّن يُكَذِّبُ بِـَٔايَـٰتِنَا فَهُمْ يُوزَعُونَ ﴿٨٣﴾

84. Markay yimaaddaanna wuxuu ku dhahaa miyaad beeniseen aayaadkaygii idinkoon ku koobin ogaansho, maxaadse fali jirteen.

حَتَّىٰٓ إِذَا جَآءُو قَالَ أَكَذَّبْتُم بِـَٔايَـٰتِى وَلَمْ تُحِيطُوا۟ بِهَا عِلْمًا أَمَّاذَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٨٤﴾

85. Waxaa ku dhacay qawlkii (ciqaabtii) dulmigooda dartiis mana hadlayaan.

وَوَقَعَ ٱلْقَوْلُ عَلَيْهِم بِمَا ظَلَمُوا۟ فَهُمْ لَا يَنطِقُونَ ﴿٨٥﴾

86. Miyeyna arkayn inaan uga yeellay habeenka inay ku xasilaan, maalintana arag, arrintaasna calaamooyin yaa ugu sugan ciddii rumayn (xaqa).

أَلَمْ يَرَوْا۟ أَنَّا جَعَلْنَا ٱلَّيْلَ لِيَسْكُنُوا۟ فِيهِ وَٱلنَّهَارَ مُبْصِرًا ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَـَٔايَـٰتٍ لِّقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴿٨٦﴾

Waana inay Ilaahay talo saarato cidda xaqa ku toosan oo ah inay waxa la faray falaan, ka dibna Alle ku kalsoonaadaan, cid xaqa ka dhaga la'na oo ka indho la'na ruux hanuunin kara oo aan Ilaahay ahayn ma jiro.

Markay qiyaamadu imaanna waxaa soo bixi daabbad la hadli dadka, waxaa loo soo kulmin ummad kasta kooxihii beenin jiray xaqa, laguna canaanan inay xaqa beeniyeen iyagoon koobin cilmigiisa, waxaana ku dhici ciqaab dulmigooda dartiis. Habeenka iyo maalintana waano ugu filan ciddii rumeyn. Qiyaamadana waxaa ka horreeya toban calaamo, sida sugan. **[An-Naml: 79-86].**

87. Xusuuso maalinta la afuufi suurka oos argagixi waxa ku sugan samooyinka iyo dhulka

وَيَوْمَ يُنفَخُ فِى ٱلصُّورِ فَفَزِعَ مَن فِى ٱلسَّمَـٰوَٰتِ وَمَن فِى ٱلْأَرْضِ إِلَّا

cidduu Alle doono mooyee, dhammaanna way u imaan Alle iyagoo dullaysan.

مَن شَآءَ ٱللَّهُ ۚ وَكُلٌّ أَتَوْهُ دَٰخِرِينَ ﴿٨٧﴾

88. Waxaadna arkaysaa buurihii ood u malayn inay ingagan tahay (sugan tahay) iyadoo u socota sida daruuraha, waase sancada Allaha sugay wax kasta, Alle na waa ogaha waxaad falaysaaan.

وَتَرَى ٱلْجِبَالَ تَحْسَبُهَا جَامِدَةً وَهِىَ تَمُرُّ مَرَّ ٱلسَّحَابِ ۚ صُنْعَ ٱللَّهِ ٱلَّذِىٓ أَتْقَنَ كُلَّ شَىْءٍ ۚ إِنَّهُۥ خَبِيرٌۢ بِمَا تَفْعَلُونَ ﴿٨٨﴾

89. Ciddii la timaadda wanaag wuxuu mudan wax ka khayr roon, argagaxa maalintaasna iyagu way ka aammin noqon.

مَن جَآءَ بِٱلْحَسَنَةِ فَلَهُۥ خَيْرٌ مِّنْهَا وَهُم مِّن فَزَعٍ يَوْمَئِذٍ ءَامِنُونَ ﴿٨٩﴾

90. Ciddiise la timaadda xumaan waxaa loogu tuuri wajiga naarta, miyaa laydinka abaal mariyaa waxaad falayseen mooyee.

وَمَن جَآءَ بِٱلسَّيِّئَةِ فَكُبَّتْ وُجُوهُهُمْ فِى ٱلنَّارِ هَلْ تُجْزَوْنَ إِلَّا مَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٩٠﴾

Alle wuxuu ka warrami in suurka la afuufi oos dhiman ruux kasta waxa Alle reebo mooyee, doorsoon badanna dhici, sida buuraha, dhulka, iyo dadkuba, Ilaaheense waa kan sugay abuurka wax kasta, wax walbana og, wanaaggana wanaag ku abaal mariya iyo wax ka sii fiican, xumaantana naar ku abaal mariya isagoon dulmiyeyn, qiyaamaduna waa maalin wayn oo quraanku wax badan ka digay, oyna habboon tahay in loo darbado, loona shaqaysto, kaasoo ah wanaag falid, xumaan ka fogaansho iyo xaq raacid, waana maalinta carruurta cirroole ka yeeli, cidna cid kale wax u tarayn, in Alle doono mooyee. **[An-Naml: 87-90].**

91. Waxaa uun lay faray inaan caabudo Rabbiga baladkan (maka) ee ah kan xarrimay iyada, oo wax kastana iska leh, waxaana lay faray inaan ahaado muslimiinta.

إِنَّمَآ أُمِرْتُ أَنْ أَعْبُدَ رَبَّ هَٰذِهِ ٱلْبَلْدَةِ ٱلَّذِى حَرَّمَهَا وَلَهُۥ كُلُّ شَىْءٍ ۖ وَأُمِرْتُ أَنْ أَكُونَ مِنَ ٱلْمُسْلِمِينَ ﴿٩١﴾

92. Iyo inaan akhriyo quraanka ruuxiise hanuuna wuxuu uun u hanuunay naftiisa, ruuxiise dhuma waxaad dhahdaa anugu

وَأَنْ أَتْلُوَا۟ ٱلْقُرْءَانَ ۖ فَمَنِ ٱهْتَدَىٰ فَإِنَّمَا يَهْتَدِى لِنَفْسِهِۦ ۖ وَمَن ضَلَّ فَقُلْ إِنَّمَآ أَنَا۠ مِنَ ٱلْمُنذِرِينَ ﴿٩٢﴾

waxaan uun ahay kuwa diga.

93. Waxaadna dhahdaa mahad Alle ayaa iska leh wuxuu idin tusin aayaadkiisa oo aqoonsanaysaan, mana aha Rabbigaa mid halmaansan waxaad falaysaan.

وَقُلِ ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ سَيُرِيكُمْ ءَايَٰتِهِۦ فَتَعْرِفُونَهَا ۚ وَمَا رَبُّكَ بِغَٰفِلٍ عَمَّا تَعْمَلُونَ ﴿٩٣﴾

Alle wuxuu faray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu caabudo Rabbiga magaalada barakaysan ee Maka, ee xurmeeyey, iyo inuu u hoggaansamo, quraankana akhriyo, illeen ciddii hanuunta wuxuu uun wax u taray naftiisa, tii dhuntana waxay uun dhibtay nafteeda.

Nabigana waxaa uun saaran u digid iyo gaadhsiin xaqa, mahadna Alle ayaa iska leh, dadkana tusin doona aayaadkiisa si ay xujadu u qabato, wax uu ka halmaansan yahay waxay falina ma jirto, magaalo walba Alle ayaa iska leh ee waxaa maka loo sheegay sharafteeda. Waxaana sugnaatay in la reebay goynta geedaheeda, dilidda ugaadheeda, iyo qaadidda baadideeda, cidaan baytinayn. Si kastood tahayna Alle waa ku og yahay.

Cumar binu Cabdi Casiis wuxuu yidhi: Alle ma halmaamo xataa raadka gomadaha dadka ee dabayshu tirtirayso. **[An-Naml: 91-93].**

Suurat Al-Qasas

سُورَةُ ٱلْقَصَصِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Wuxuu ku tusin mucjisada quraanka.

طسٓمٓ ﴿١﴾

2. Taasina waa aayaadka kitaabka (quraanka) ee cad.

تِلْكَ ءَايَٰتُ ٱلْكِتَٰبِ ٱلْمُبِينِ ﴿٢﴾

3. Waxaannu kugu akhrin korkaaga warkii (Nabi) Muuse iyo Fircoon si xaq ah qoomkii rumayn.

نَتْلُوا۟ عَلَيْكَ مِن نَّبَإِ مُوسَىٰ وَفِرْعَوْنَ بِٱلْحَقِّ لِقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴿٣﴾

4. Fircoon wuu isku kibriyey dhulka (Masar) wuxuuna ka yeelay ehelkiisii kooxo, isagoo yaraysan (dullayn) koox ka mid ah gawricina wiilashooda oo dayn haweenkooda wuxuuna ka mid ahaa kuwa wax fasaadiya.

إِنَّ فِرْعَوْنَ عَلَا فِى ٱلْأَرْضِ وَجَعَلَ أَهْلَهَا شِيَعًا يَسْتَضْعِفُ طَآئِفَةً مِّنْهُمْ يُذَبِّحُ أَبْنَآءَهُمْ وَيَسْتَحْىِۦ نِسَآءَهُمْ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ مِنَ ٱلْمُفْسِدِينَ ﴿٤﴾

5. Waxaannu dooni inaan ku mannaysanno (wax siinno) kuwii lagu dullaysanayay dhulka kana yeello imaamyo, kana yeello kuwa dhaxli dhulka.

وَنُرِيدُ أَن نَّمُنَّ عَلَى ٱلَّذِينَ ٱسْتُضْعِفُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ وَنَجْعَلَهُمْ أَئِمَّةً وَنَجْعَلَهُمُ ٱلْوَٰرِثِينَ ﴿٥﴾

6. Oon makansiinno dhulka, tusinnana fircoon iyo haamaan iyo januuddooda waxay ka digtoonaayeen (halaaggooda).

وَنُمَكِّنَ لَهُمْ فِى ٱلْأَرْضِ وَنُرِىَ فِرْعَوْنَ وَهَٰمَٰنَ وَجُنُودَهُمَا مِنْهُم مَّا كَانُوا۟ يَحْذَرُونَ ﴿٦﴾

Suuraddan waxay si gooni ah uga warrantay wixii dhex maray Nabi Muuse iyo daalimkii Fircoon ahaa, ee isku kibriyey kalana qaybiyey dadkii, wiilashana laayey gabdhahana shaqo u reebtay, hase yeeshee wuxuu Alle qaddaray in kuwii la dullaysan jiray oo xaqa rumeeyey ay dhulka u hadhaan, madaxna noqdaan, Fircoon iyo gacanyarihiisii u dhaga nuglaa ee haamaan iyo colkiisiina la tusiyo waxay ka cabsanayeen oo ah in xukunka laga qaado. Qudrada Alle iyo awooddiisa iyo wuxuu xukumana wax qiyaasi ama ogaan ma jiro. **[Al-Qasas: 1-6].**

وَأَوْحَيْنَآ إِلَىٰٓ أُمِّ مُوسَىٰٓ أَنْ أَرْضِعِيهِ ۖ فَإِذَا خِفْتِ عَلَيْهِ فَأَلْقِيهِ فِى ٱلْيَمِّ وَلَا تَخَافِى وَلَا تَحْزَنِىٓ ۖ إِنَّا رَآدُّوهُ إِلَيْكِ وَجَاعِلُوهُ مِنَ ٱلْمُرْسَلِينَ ﴿٧﴾

7. Waxaan u waxayoonnay ku (ilhaamaynay) Muuse hooyadiis nuuji, markaad u cabsatana ku tuur badda, hana cabsan hana murugoon, annagaa kugu soo celine kana yeeli kuwa la diro (rasuul).

فَٱلْتَقَطَهُۥٓ ءَالُ فِرْعَوْنَ لِيَكُونَ لَهُمْ عَدُوًّا وَحَزَنًا ۗ إِنَّ فِرْعَوْنَ وَهَٰمَٰنَ وَجُنُودَهُمَا كَانُوا۟ خَٰطِـِٔينَ ﴿٨﴾

8. Waxaana qaatay fircoon dadkiisii isagoo u noqon doona col iyo walbahaar, Fircoon iyo Haamaan iyo colkoodiina waxay ahaayeen kuwo danbiilayaal ah.

وَقَالَتِ ٱمْرَأَتُ فِرْعَوْنَ قُرَّتُ عَيْنٍ لِّى وَلَكَ ۖ لَا تَقْتُلُوهُ عَسَىٰٓ أَن يَنفَعَنَآ أَوْ نَتَّخِذَهُۥ وَلَدًا وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ ﴿٩﴾

9. Waxayna tidhi haweenaydii fircoon waa raaxada ishayda iyo taada ee ha dilina, waxay u dhawdahay inuu ina anfaco ama aan ka yeelanno wiile, mana oga iyagu (dhabta).

Waa la dhalay Nabi Muuse, hooyadiina way u cabsatay, waxaana Alle ku ilhaameeyey inay badda ku tuurto isagoo weel ku jira, wuxuuna Ilahay ku tuuray qalbigeeda inayan cabsannin, murginna, maxaa yeelay wuu ku soo celin, kana yeeli rasuul, waxaase helay Fircoon colkiisii isagoo ku noqon doona naxdin iyo col, haweenaydii Fircoon markay aragtay yey ku tidhi fircoon ha dilina waa nuurka iyo raaxada indhaheennee waxayna u dhawdahay inuu ina anfaco ama aan wiil ka dhigannee, mana oga wuxuu xaalku ku dambayn. Waxaa la sheegay in Fircoon yidhi: aduu kuu yahay raaxada indhaha anise iima aha, waxayna noqotay sidii. **[Al-Qasas: 7-9].**

وَأَصْبَحَ فُؤَادُ أُمِّ مُوسَىٰ فَٰرِغًا ۖ إِن كَادَتْ
لَتُبْدِى بِهِۦ لَوْلَآ أَن رَّبَطْنَا عَلَىٰ قَلْبِهَا
لِتَكُونَ مِنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٠﴾

10. Wuxuu ahaaday qalbigii Muuse hooyadiis mid ka madhan (waxaan Muuse ka ahayn) waxayna u dhawaatay inay muujiso haddaannaan adkaynin qalbigeeda inay ahaato mu'miniinta.

وَقَالَتْ لِأُخْتِهِۦ قُصِّيهِ ۖ فَبَصُرَتْ بِهِۦ
عَن جُنُبٍ وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ ﴿١١﴾

11. Waxayna ku tidhi walaashiis raac raac, waxayna ka aragtay dhinac fog iyagoon ogayn.

* وَحَرَّمْنَا عَلَيْهِ ٱلْمَرَاضِعَ مِن قَبْلُ
فَقَالَتْ هَلْ أَدُلُّكُمْ عَلَىٰٓ أَهْلِ بَيْتٍ
يَكْفُلُونَهُۥ لَكُمْ وَهُمْ لَهُۥ نَٰصِحُونَ ﴿١٢﴾

12. Waxaanna ka reebnay korkiisa nuugmada horay, waxayna tidhi gabadhii maydin tusiyaa qoys idiin dhaqaalayn una samo fali.

فَرَدَدْنَٰهُ إِلَىٰٓ أُمِّهِۦ كَىْ تَقَرَّ عَيْنُهَا وَلَا
تَحْزَنَ وَلِتَعْلَمَ أَنَّ وَعْدَ ٱللَّهِ حَقٌّ
وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٣﴾

13. Waxaanna ku soo celinnay hooyadiis, si ay u raaxaysato isheedu una murgin, ogaatana in yabooha Alle yahay xaq laakiin dadka badankiisu ma oga.

Way walbahaartay Nabi Muuse hooyadiis markii la helay wiilkeedii, waxayna u dhawaatay inay sheegto ee Alle ayaa adkeeyey qalbigeeda, kana yeelay mu'minad, waxayna fartay gabadh walaashiis ah inay dabo socoto kana fiiriso meel durugsan si ay ula socoto xaalka iyagoon ogayn, wuuse diiday nuugmadii haween kale illeen Ilaahbaa horay u qaddaraye, waxayna u sheegtay gabadhii inay hayso qoys dhaqaalayn, saasna Alle ugu soo celiyey Nabi Muuse hooyadiis in isheedu qabowdo, oyna nixin, ogaatana in yabooha Alle xaq yahay, dadka badankiise ogayn. **[Al-Qasas: 10-13].**

وَلَمَّا بَلَغَ أَشُدَّهُۥ وَٱسْتَوَىٰٓ ءَاتَيْنَٰهُ
حُكْمًا وَعِلْمًا ۚ وَكَذَٰلِكَ نَجْزِى
ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿١٤﴾

14. Markuu gaadhay (Nabi) Muuse xooggiisa oo ekaaday yaan siinnay xigmo iyo cilmi, saasaanna ku abaal marinnaa sama falayaasha.

وَدَخَلَ ٱلْمَدِينَةَ عَلَىٰ حِينِ غَفْلَةٍ مِّنْ
أَهْلِهَا فَوَجَدَ فِيهَا رَجُلَيْنِ يَقْتَتِلَانِ
هَٰذَا مِن شِيعَتِهِۦ وَهَٰذَا مِنْ عَدُوِّهِۦ ۖ

15. Wuxuuna galay magaaladii waqti aan dadkeedu ogayn, wuxuuna helay labo nin oo dagaallami, oo kaasi yahay qoladiisa (ilma

Yacquub) kaasna yahay colkiisa, waxaana u kaalmo warsaday kii qaraabadiisa ahaa colkiisa (korkiisa) wuuna feedhay Muuse wuuna dilay, wuxuuna yidhi waa camal shaydaan, isaguna waa col baadiyeeya oo cad.

فَٱسْتَغَٰثَهُ ٱلَّذِى مِن شِيعَتِهِۦ عَلَى ٱلَّذِى مِنْ عَدُوِّهِۦ فَوَكَزَهُۥ مُوسَىٰ فَقَضَىٰ عَلَيْهِ ۖ قَالَ هَٰذَا مِنْ عَمَلِ ٱلشَّيْطَٰنِ ۖ إِنَّهُۥ عَدُوٌّ مُّضِلٌّ مُّبِينٌ ﴿١٥﴾

16. Wuxuu yidhi Allow anigu waxaan dulmiyey naftayda ee ii dambi dhaaf wuuna u dambi dhaafay illeen Ilaahay waa dambi dhaafe naxariistee.

قَالَ رَبِّ إِنِّى ظَلَمْتُ نَفْسِى فَٱغْفِرْ لِى فَغَفَرَ لَهُۥٓ ۚ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلْغَفُورُ ٱلرَّحِيمُ ﴿١٦﴾

17. Wuxuuna yidhi Allow nicmadaad ii nicmaysay darteed yaanan noqonnin mid u kaalmeeya dambiilayaasha.

قَالَ رَبِّ بِمَآ أَنْعَمْتَ عَلَىَّ فَلَنْ أَكُونَ ظَهِيرًا لِّلْمُجْرِمِينَ ﴿١٧﴾

Wuu waynaaday Nabi Muuse markaasuu Alle u waxyooday illeen wuxuu ahaa sama falee, markuu galay magaaladii manfiis iyadooy tahay waqti aan la ogayn, yuu arkay labo nin oo midna yahay qoomkiisii midna colkiisii oo dagaallami, markuu ka hiil doonayna wuxuu feedhay kii colka ahaa wuuna dilay, hase yeeshee wuu qoomameeyey oo shallaayey illeen lama farine, wuuna tooba keenay, Alle na waa ka aqbalay illeen waa toobad aqbalee. **[Al-Qasas: 14-17].**

18. Wuxuu ku waabariistay magaaladii isagoo cabsan oo sugi (dhib), markaasuu ku soo baxay kii gargaarka warsaday shalay oo qaylyi, wuxuuna ku yidhi Muuse: adugu waxaad tahay baadi cad.

فَأَصْبَحَ فِى ٱلْمَدِينَةِ خَآئِفًا يَتَرَقَّبُ فَإِذَا ٱلَّذِى ٱسْتَنصَرَهُۥ بِٱلْأَمْسِ يَسْتَصْرِخُهُۥ ۖ قَالَ لَهُۥ مُوسَىٰٓ إِنَّكَ لَغَوِىٌّ مُّبِينٌ ﴿١٨﴾

19. Markuu doonay inuu qabto (wax yeelo) kii colka u ahaana wuxuu yidhi (kii loo gargaarayey): muusow ma waxaad dooni inaad i disho sidaad u dishay naf (kale) shalay, ma doonaysid inaad waxaan jabbaar (kibir badane)

فَلَمَّآ أَنْ أَرَادَ أَن يَبْطِشَ بِٱلَّذِى هُوَ عَدُوٌّ لَّهُمَا قَالَ يَٰمُوسَىٰٓ أَتُرِيدُ أَن تَقْتُلَنِى كَمَا قَتَلْتَ نَفْسًۢا بِٱلْأَمْسِ ۖ إِن تُرِيدُ إِلَّآ أَن تَكُونَ جَبَّارًا فِى ٱلْأَرْضِ وَمَا تُرِيدُ أَن تَكُونَ مِنَ ٱلْمُصْلِحِينَ ﴿١٩﴾

ahayn dhulka ku noqoto, mana doonaysid inaad noqoto kuwa wax wanaajiya.

20. Waxaana ka yimid magaalada xaggeeda fog nin ordi oo leh: muusow, qoomku waxay ku tashanayaan inay ku dilaan ee bax anuguna waan kuu naseexayne.

وَجَآءَ رَجُلٌ مِّنْ أَقْصَا ٱلْمَدِينَةِ يَسْعَىٰ قَالَ يَٰمُوسَىٰٓ إِنَّ ٱلْمَلَأَ يَأْتَمِرُونَ بِكَ لِيَقْتُلُوكَ فَٱخْرُجْ إِنِّى لَكَ مِنَ ٱلنَّٰصِحِينَ ﴿٢٠﴾

Aayaduhu waxay inooga warrami in Nabi Muuse markuu dilay ninkay colka ahaayeen uu ahaaday mid cabsan oo wax yeello ka yaabi, wuxuuna haddana mar labaad la kulmay kuu shalay u hiilliyey oo haddana mid kale la diriri. Markuu ku sheegay doqonnimo oo doonay inuu qabto kay colka ahaayeenna, wuxuu faafiyey in Nabi Muuse shalay nin dilay maantana dooni inuu wax dilo, dhulkana xumaan ku faafiyo, qoomkiina waxay ku tashadeen in la dilo Nabi Muuse, waxaase u soo digay nin naasix u ah. **[Al-Qasas: 18-20].**

21. Wuuna ka baxay (magaaladii) isagoo cabsan oo filan (waxyeello), wuxuuna yidhi Allow iga kori qoomka daalimiinta ah.

فَخَرَجَ مِنْهَا خَآئِفًا يَتَرَقَّبُ ۖ قَالَ رَبِّ نَجِّنِى مِنَ ٱلْقَوْمِ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٢١﴾

22. Markuu u jahaystay madyan xaggeedana wuxuu yidhi wuxuu u dhaw yahay Rabbigay inuu igu (hanuuniyo) jidka toosan.

وَلَمَّا تَوَجَّهَ تِلْقَآءَ مَدْيَنَ قَالَ عَسَىٰ رَبِّىٓ أَن يَهْدِيَنِى سَوَآءَ ٱلسَّبِيلِ ﴿٢٢﴾

23. Markuu gaadhay biyaha madyanna wuxuu ka helay ummad dad ah oo waraabinaysa wuxuuna ka helay sokodooda labo haweena oo reebi (adhigooda), wuxuuna yidhi muxuu xaalkiinnu yahay, waxayna dheheen ma waraabinno intay ka fulaan xoola jirku, aabbahannana waa oday wayn.

وَلَمَّا وَرَدَ مَآءَ مَدْيَنَ وَجَدَ عَلَيْهِ أُمَّةً مِّنَ ٱلنَّاسِ يَسْقُونَ وَوَجَدَ مِن دُونِهِمُ ٱمْرَأَتَيْنِ تَذُودَانِ ۖ قَالَ مَا خَطْبُكُمَا ۖ قَالَتَا لَا نَسْقِى حَتَّىٰ يُصْدِرَ ٱلرِّعَآءُ ۖ وَأَبُونَا شَيْخٌ كَبِيرٌ ﴿٢٣﴾

24. Markaasuu u waraabiyey wuxuuna u jeedsaday xagga hooska wuxuuna yidhi Allow waxaad ii soo dejiso (i siiso) oo khayra waan u baahnahay.

فَسَقَىٰ لَهُمَا ثُمَّ تَوَلَّىٰٓ إِلَى ٱلظِّلِّ فَقَالَ رَبِّ إِنِّى لِمَآ أَنزَلْتَ إِلَىَّ مِنْ خَيْرٍ فَقِيرٌ ﴿٢٤﴾

Markay ku tashadeen qoomkii inay dilaan Nabi Muuse yuu baxay oo ka tegay masar isagoo in la haleelo ka cabsan, oo Alle baryi inuu ka koriyo daalimiinta, wuxuuna aaday xagga madyan isagoo Alle ka baryi ku toosin jidka toosan, markuu gaadhay biyahii Madyanna wuxuu la kulmay dad cabbi iyo gabdho celin xoolahooda, markuu warsadayna oy u sheegeen in aabbahood yahay oday wayn, oyna cabbin inta dadku ka cabbo, wuuse u waraabiyey oo hoos fadhiistay isagoo Alle baryi, waana kaas imtixaanku, waxayna la mid tahay hijradii Nabiga ammaan iyo nabadgelyo korkiisa Alle ha yeelee Madiino ku aaday, waxayna ku tusin adkaysiga ku sugnaanta xaqa iyo Alle ku xidhnaanta, iyo in Ilaahay u gargaari ciddii xaqa u gargaarta kuna adkaata, xaq oon muuqan oon dadku ku dhaqmaynna ma aha wax habboon. **[Al-Qasas: 21-24].**

25. Markaasay u timid gabdhihii middood iyadoo xishoon waxayna ku tidhi aabahay wuu kuu yeedhi inuu kaa abaal mariyo ujuuradii waraabintaada annaga, markuu u yimid oos uga warramay qisadii yuu ku yidhi ha cabsan waad ka kortay qoomkii daalimiinta ahaa.

فَجَآءَتْهُ إِحْدَىٰهُمَا تَمْشِى عَلَى ٱسْتِحْيَآءٍ قَالَتْ إِنَّ أَبِى يَدْعُوكَ لِيَجْزِيَكَ أَجْرَ مَا سَقَيْتَ لَنَا ۚ فَلَمَّا جَآءَهُۥ وَقَصَّ عَلَيْهِ ٱلْقَصَصَ قَالَ لَا تَخَفْ ۖ نَجَوْتَ مِنَ ٱلْقَوْمِ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٢٥﴾

26. Waxayna tidhi middood aabbow noo ijaar, illeen waxaa u khayr roon cid la ijaarto mid xoog badan oo aamin ah.

قَالَتْ إِحْدَىٰهُمَا يَٰٓأَبَتِ ٱسْتَـْٔجِرْهُ ۖ إِنَّ خَيْرَ مَنِ ٱسْتَـْٔجَرْتَ ٱلْقَوِىُّ ٱلْأَمِينُ ﴿٢٦﴾

27. Wuxuuna ku yidhi anugu waxaan dooni inaan kuu guuriyo labadaydan gabdhood middood inaan ku ijaarto siddeed sano haddaad dhammayso tobankana waa adiga agtaada, mana doonayo inaan ku dhibo

قَالَ إِنِّىٓ أُرِيدُ أَنْ أُنكِحَكَ إِحْدَى ٱبْنَتَىَّ هَٰتَيْنِ عَلَىٰٓ أَن تَأْجُرَنِى ثَمَٰنِىَ حِجَجٍ ۖ فَإِنْ أَتْمَمْتَ عَشْرًا فَمِنْ عِندِكَ ۖ وَمَآ أُرِيدُ أَنْ أَشُقَّ عَلَيْكَ ۚ سَتَجِدُنِىٓ إِن شَآءَ ٱللَّهُ مِنَ ٱلصَّٰلِحِينَ ﴿٢٧﴾

waxaadna igu ogaan hadduu Alle doono kuwa wanaagsan.

28. Wuxuuna yidhi kaasi waa ballan dhexdeenna ah, labada muddo kaan dhammaystana haygu xadgudbin (ood wax ka badan iga dalabto), Alle na waxaan sheegayno waa u wakiil.

قَالَ ذَٰلِكَ بَيْنِي وَبَيْنَكَ ۖ أَيَّمَا ٱلْأَجَلَيْنِ قَضَيْتُ فَلَا عُدْوَانَ عَلَيَّ ۖ وَٱللَّهُ عَلَىٰ مَا نَقُولُ وَكِيلٌ ﴿٢٨﴾

Markay gabdhihii u warrameen aabbahood yuu middood u soo diray, waxayna ugu timid iyadoo xishoon oon hadalka badinayn isqaawinayna bixid iyo galid badanna ahayn siduu sayid Cumar yidhi, waxayna u sheegtay inuu aabbaheed u yeedhi si uu uga abaal mariyo waraabintiisii, markuu u yimidna oos uga warramay xaalkiisa wuu xasiliyey oo u sheegay inuusan ka cabsan daalimiinta kana nabad galay, markay gabdhaha middood u ishaartay inuu u ijaaro iyadoo ku sheegi xoog iyo aamminnimo yuu u guuriyey middood kugulana ballamay inuu siddeed sano ama toban hadduu doono u ijaarraado, saasayna ku heshiiyeen, waxayna tusin wanaagga taakulaynta dadka tabarta yar iyo Alle ku xidhnaanta, tan kale xishood iyo sharafta wanaaggiisa, iyo inuu xoogga iyo aaminaadda lagu doorto cidda shaqayn, u guurinta ninka wanaagsan ee sharafta iyo diinta leh, iyo shaqada xalaasha ah inay sharaf tahay, si kasta ha u adkaatee. Nabigana (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) waxaa laga weriyay: Nabi Muuse wuxuu u ijaaray naftiisa is dhawrid iyo calooshiisa. **[Al-Qasas: 25-28].**

29. Markuu dhammeeyey (Nabi) Muuse muddadii oo la tegay ehelkiisii wuxuu ku arkay dhinaca Dhuur dab, wuxuuna ku yidhi ehelkiisii suga waxaan arkaa dabe waxaan u dhawahay inaan idiinka keeno war ama dhuxul daba inaad kulaashaan.

۞ فَلَمَّا قَضَىٰ مُوسَى ٱلْأَجَلَ وَسَارَ بِأَهْلِهِۦٓ ءَانَسَ مِن جَانِبِ ٱلطُّورِ نَارًا ۖ قَالَ لِأَهْلِهِ ٱمْكُثُوٓا۟ إِنِّىٓ ءَانَسْتُ نَارًا لَّعَلِّىٓ ءَاتِيكُم مِّنْهَا بِخَبَرٍ أَوْ جَذْوَةٍ مِّنَ ٱلنَّارِ لَعَلَّكُمْ تَصْطَلُونَ ﴿٢٩﴾

30. Markuu yimidna waxaa looga dhawaaqay togga dhiniciisa midig, meeshii barakaysnayd oo geedka (isagoo la yidhi) anugu Ilaahay baan ahay Rabbiga caalamka ah.

فَلَمَّآ أَتَىٰهَا نُودِىَ مِن شَـٰطِئِ ٱلْوَادِ ٱلْأَيْمَنِ فِى ٱلْبُقْعَةِ ٱلْمُبَـٰرَكَةِ مِنَ ٱلشَّجَرَةِ أَن يَـٰمُوسَىٰٓ إِنِّىٓ أَنَا ٱللَّهُ رَبُّ ٱلْعَـٰلَمِينَ ﴿٣٠﴾

وَأَنْ أَلْقِ عَصَاكَ ۚ فَلَمَّا رَءَاهَا تَهْتَزُّ كَأَنَّهَا جَآنٌّ وَلَّىٰ مُدْبِرًا وَلَمْ يُعَقِّبْ ۚ يَٰمُوسَىٰٓ أَقْبِلْ وَلَا تَخَفْ ۖ إِنَّكَ مِنَ ٱلْءَامِنِينَ ﴿٣١﴾

31. Ee tuur ushaada markuu arkay iyadoo gilgilanna ood mooddo mas wuu jeedsaday isagoo carari, mana soo jeedsan, (waxaana lagu yidhi): Muusow soo qaabil (soo noqo), hana cabsan adugu aamin baad tahay (waad nabadgali).

ٱسْلُكْ يَدَكَ فِى جَيْبِكَ تَخْرُجْ بَيْضَآءَ مِنْ غَيْرِ سُوٓءٍ وَٱضْمُمْ إِلَيْكَ جَنَاحَكَ مِنَ ٱلرَّهْبِ ۖ فَذَٰنِكَ بُرْهَٰنَانِ مِن رَّبِّكَ إِلَىٰ فِرْعَوْنَ وَمَلَإِيْهِۦٓ ۚ إِنَّهُمْ كَانُوا۟ قَوْمًا فَٰسِقِينَ ﴿٣٢﴾

32. Gali gacantaada jeebkaaga waxay soo bixi iyadoo cad xumaan (cudur) la'aan, iskuna dhaji gacantaada argagaxa dartiis taasina waa xujooyin Alle ka ahaatay oo Fircoon iyo qoomkiisa (loo diray) waana qoom faasiqiina.

Wuu dhammaystay Nabi Muuse muddadii wuxuuna la tagay ehelkii, wuxuuna arkay iftiin markuu tagayna waa loo waxyooday, waxaana muuqatay calaamaddii usha iyo gacanta, cabsidiina waxay ku rogmatay Fircoon iyo colkiisii, illeen faasiqiin bay ahaayeene, saasayna qisadu ku socotaa inta laga halaagi Fircoon iyo colkiisa. **[Al-Qasas: 29-32].**

قَالَ رَبِّ إِنِّى قَتَلْتُ مِنْهُمْ نَفْسًا فَأَخَافُ أَن يَقْتُلُونِ ﴿٣٣﴾

33. Wuxuu yidhi Allow waxaan ka dilay naf waxaana ka cabsan inay i dilaan.

وَأَخِى هَٰرُونُ هُوَ أَفْصَحُ مِنِّى لِسَانًا فَأَرْسِلْهُ مَعِىَ رِدْءًا يُصَدِّقُنِىٓ ۖ إِنِّىٓ أَخَافُ أَن يُكَذِّبُونِ ﴿٣٤﴾

34. Walaalkay Haaruun baana iga fasiixsan carrabka (hadalka), ee ila dir xoojin ha ii rumeeyee, waxaan ka cabsan inay i beeniyaan.

قَالَ سَنَشُدُّ عَضُدَكَ بِأَخِيكَ وَنَجْعَلُ لَكُمَا سُلْطَٰنًا فَلَا يَصِلُونَ إِلَيْكُمَا بِـَٔايَٰتِنَآ ۚ أَنتُمَا وَمَنِ ٱتَّبَعَكُمَا ٱلْغَٰلِبُونَ ﴿٣٥﴾

35. Wuxuu yidhi (Alle) waannu ku xoojin cududdaada walaalkaa waxaanna idiin yeeli xujo idimana gaadhayaan (dhibkiinna) aayaadkannaga dartood, idinka iyo inta idin raacday yaana adkaan.

فَلَمَّا جَآءَهُم مُّوسَىٰ بِـَٔايَـٰتِنَا بَيِّنَـٰتٍ قَالُوا۟ مَا هَـٰذَآ إِلَّا سِحْرٌ مُّفْتَرًى وَمَا سَمِعْنَا بِهَـٰذَا فِىٓ ءَابَآئِنَا ٱلْأَوَّلِينَ ﴿٣٦﴾

36. Markuu ula yimid Muuse aayaadkannaga oo cad cad waxay dheheen kani waa sixir la abuurtay mana aannaan ku maqal kan (oo kale) aabbayaalkannagii horreeyey.

وَقَالَ مُوسَىٰ رَبِّىٓ أَعْلَمُ بِمَن جَآءَ بِٱلْهُدَىٰ مِنْ عِندِهِۦ وَمَن تَكُونُ لَهُۥ عَـٰقِبَةُ ٱلدَّارِ ۖ إِنَّهُۥ لَا يُفْلِحُ ٱلظَّـٰلِمُونَ ﴿٣٧﴾

37. Wuxuuna yidhi Nabi Muuse Rabbigey baa og cidda kala timid hanuun agtiisa iyo cidday u ahaan cidhibta dambe illeen ma liibaano daalime.

Nabi Muuse wuxuu u cawday Alle isagoo sheegi inuu naf ka dilay, kana yaabi inay dilaan, Haaruunna ka fasiixsan yahay oos Alle ka dalbi inuu ku xoojiyo oo la diro, Alle ayaa ajiibay oo lala diray xujona yeelay, uguna bishaareeyey inay dhibayn, oyna iyagu adkaan, gaalo waa caadadeede way beeniyeen xaqii waxayna ku sheegeen sixir, Alle ayaase og cidda hanuun la timid iyo tan guulaysan, gaalase ma liibaanto, waxay dheheen dadkii hore qaarkood: cid walaal uga wax tar badan Nabi Muuse ma jirto, Alle ayuu baryey inuu Haaruun Nabi ka yeelo waana ka aqbalay. **[Al-Qasas: 33-37].**

وَقَالَ فِرْعَوْنُ يَـٰٓأَيُّهَا ٱلْمَلَأُ مَا عَلِمْتُ لَكُم مِّنْ إِلَـٰهٍ غَيْرِى فَأَوْقِدْ لِى يَـٰهَـٰمَـٰنُ عَلَى ٱلطِّينِ فَٱجْعَل لِّى صَرْحًا لَّعَلِّىٓ أَطَّلِعُ إِلَىٰٓ إِلَـٰهِ مُوسَىٰ وَإِنِّى لَأَظُنُّهُۥ مِنَ ٱلْكَـٰذِبِينَ ﴿٣٨﴾

38. Wuxuu yidhi fircoon madaxeey idiinma ogi Alle iga soo hadhay ee ii huri Haamaanow dhoobada iina yeel daar (dheer) inaan daalacdo Ilaaha Muuse waxaan u malayn inuu beenaale yahaye.

وَٱسْتَكْبَرَ هُوَ وَجُنُودُهُۥ فِى ٱلْأَرْضِ بِغَيْرِ ٱلْحَقِّ وَظَنُّوٓا۟ أَنَّهُمْ إِلَيْنَا لَا يُرْجَعُونَ ﴿٣٩﴾

39. Waxay isku kibriyeen isaga iyo colkiisiiba dhulka xaq darro waxayna u maleeyeen inaan xaggannaga loo soo celinayn.

فَأَخَذْنَـٰهُ وَجُنُودَهُۥ فَنَبَذْنَـٰهُمْ فِى ٱلْيَمِّ ۖ فَٱنظُرْ كَيْفَ كَانَ عَـٰقِبَةُ ٱلظَّـٰلِمِينَ ﴿٤٠﴾

40. Waana qabannay isaga iyo colkiisii waxaanna ku tuuray badda ee day siday noqotay cidhibtii daalimiinta.

41. Waxaanna ka yeellay madax ugu yeedha naarta, maalinta qiyaamana looma gargaaro.

وَجَعَلْنَٰهُمْ أَئِمَّةً يَدْعُونَ إِلَى ٱلنَّارِ ۖ وَيَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ لَا يُنصَرُونَ ﴿٤١﴾

42. Waxaana raacinnay adduunyadan lacnad, maalinta qiyaamana waxay noqon kuwa la dheereeyey (la halaagay).

وَأَتْبَعْنَٰهُمْ فِى هَٰذِهِ ٱلدُّنْيَا لَعْنَةً ۖ وَيَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ هُم مِّنَ ٱلْمَقْبُوحِينَ ﴿٤٢﴾

43. Waxaan siinnay (Nabi) Muuse kitaabka ka dib intaan halaagnay quruumihii hore, isagoo aragti u ah dadka iyo hanuun iyo naxariis inay xusuustaan darteed.

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا مُوسَى ٱلْكِتَٰبَ مِنۢ بَعْدِ مَآ أَهْلَكْنَا ٱلْقُرُونَ ٱلْأُولَىٰ بَصَآئِرَ لِلنَّاسِ وَهُدًى وَرَحْمَةً لَّعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ ﴿٤٣﴾

Fircoon jaahilnimadiisa iyo isla waynidiisa wuxuu sheegtay ilaahnimo, isagoo fari in loo dhiso guri wayn si uu ugu khaldo inuu Alle daydayey soona waayey, dhabtii wuu is kibriyey, maxaase ka raacay isaga iyo qoomkiisii, muxuuse ilaahnimo u sheegan waayey markii la maansheeyey ee uu cabaadayey, waana la nacladay adduun iyo aakhiraba, lana dulleeyay. Kitaabkii Tawreed ee Nabi Muuse la siiyeyna wuxuu ahaa waano, hanuun, iyo naxariis haddii dhabtiisii lagu dhaqmo inta aan la nasakhin. **[Al-Qasas: 38-43].**

44. Maadan ahayn dhinaca galbeed ee buurta markaan siinaynay Muuse amarka «Nabinimada» mana aadan ahayn kuwii joogay.

وَمَا كُنتَ بِجَانِبِ ٱلْغَرْبِىِّ إِذْ قَضَيْنَآ إِلَىٰ مُوسَى ٱلْأَمْرَ وَمَا كُنتَ مِنَ ٱلشَّٰهِدِينَ ﴿٤٤﴾

45. Laakiin waxaan ahaysiinnay quruumo waxaana ku dheeraaday cimrigii, mana aadan ahayn mid ku nagaa ehelkii madyan adoo ku akhrin korkooda aayaadkannaga laakiin annagaa ku dirray.

وَلَٰكِنَّآ أَنشَأْنَا قُرُونًا فَتَطَاوَلَ عَلَيْهِمُ ٱلْعُمُرُ ۚ وَمَا كُنتَ ثَاوِيًا فِىٓ أَهْلِ مَدْيَنَ تَتْلُوا۟ عَلَيْهِمْ ءَايَٰتِنَا وَلَٰكِنَّا كُنَّا مُرْسِلِينَ ﴿٤٥﴾

46. Mana aadan ahayn dhinicii (buurta) Dhuur markaan u dhawaaqnay laakiin waa

وَمَا كُنتَ بِجَانِبِ ٱلطُّورِ إِذْ نَادَيْنَا وَلَٰكِن رَّحْمَةً مِّن رَّبِّكَ لِتُنذِرَ

naxariista Rabbigaa inaad u digto qoom uusan u imaan dige kaa horreeyey inay waantoobaan.

قَوْمًا مَّآ أَتَىٰهُم مِّن نَّذِيرٍ مِّن قَبْلِكَ لَعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ ﴿٤٦﴾

47. Haddayan jirin in markay ku dhacdo musiibo (dhib) waxay hormarsadeen gacmahoodu darteed oo markaas ay dhahaan Allow maxaad noogu soo diri wayday rasuul oo raacno aayaadkaaga noqonnana mu'miniinta «waa la ciqaabi lahaa».

وَلَوْلَآ أَن تُصِيبَهُم مُّصِيبَةٌۢ بِمَا قَدَّمَتْ أَيْدِيهِمْ فَيَقُولُوا۟ رَبَّنَا لَوْلَآ أَرْسَلْتَ إِلَيْنَا رَسُولًا فَنَتَّبِعَ ءَايَٰتِكَ وَنَكُونَ مِنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٤٧﴾

Aayado badan yuu Alle ku caddeeyey inuusan Nabigu joogin markay wax ka dhaceen ummadihii hore, sida warkii maryan, halaaggii qoomkii Nabi Nuux, Nabi Yuusuf iyo walaalihii, iyo Nabi Muuse iyo Fircoon iyo wixii la mid ah, ee Alle wuxuu ku ogaysiiyey waxyi, Nabiguna ma joogin Dhuurkii Alle Nabi Muuse kula hadlay, iyo madyan ee waxaa ka soo wareegtay sanooyin iyo quruumo, waxaase Alle siiyey Nabiga naxariis iyo waxyi si uu ugu digo qoom jaahiliin ah oo haddii la cadaabana ku calaacali maxaa rasuul na loogu soo diri waayey aan raacno oon rumeyno.

Taasina waxay muujin xaqnimada quraanka iyo inuu yahay soo dejin Allaha wax walba og. **[Al-Qasas: 44-47].**

48. Markuu uga yimid xaqii xaggannaga yey dheheen maa la siiyo wixii la siiyey (Nabi) Muuse oo kale, miyeyna ka gaaloobin wixii la siiyey Muuse horay, oyna dhihin waa labo sixir oo iskaalmaystay waxayna dheheen annagu dhammaan waan ka gaalownay.

فَلَمَّا جَآءَهُمُ ٱلْحَقُّ مِنْ عِندِنَا قَالُوا۟ لَوْلَآ أُوتِىَ مِثْلَ مَآ أُوتِىَ مُوسَىٰٓ ۚ أَوَلَمْ يَكْفُرُوا۟ بِمَآ أُوتِىَ مُوسَىٰ مِن قَبْلُ ۖ قَالُوا۟ سِحْرَانِ تَظَٰهَرَا وَقَالُوٓا۟ إِنَّا بِكُلٍّ كَٰفِرُونَ ﴿٤٨﴾

49. Waxaad dhahdaa ka keena kitaab xagga Alle ka hanuun badan labadooda aan raacnee haddaad run sheegaysaan.

قُلْ فَأْتُوا۟ بِكِتَٰبٍ مِّنْ عِندِ ٱللَّهِ هُوَ أَهْدَىٰ مِنْهُمَآ أَتَّبِعْهُ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٤٩﴾

فَإِن لَّمْ يَسْتَجِيبُوا۟ لَكَ فَٱعْلَمْ أَنَّمَا يَتَّبِعُونَ أَهْوَآءَهُمْ ۚ وَمَنْ أَضَلُّ مِمَّنِ ٱتَّبَعَ هَوَىٰهُ بِغَيْرِ هُدًى مِّنَ ٱللَّهِ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٥٠﴾

50. Haddayna ku ajiibin (maqlin) ogow inay uun raacayaan hawadooda, wax ka dhumid badanna ma jirto cid raacday hawadeeda hanuun Alle la'aantiis, Alle na ma hanuuniyo qoom daalimiin ah.

* وَلَقَدْ وَصَّلْنَا لَهُمُ ٱلْقَوْلَ لَعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ ﴿٥١﴾

51. Dhab ahaan baan ugu xidhiidhinnay (ugu caddaynay) hadalka inay waantoobaan.

Gaaladu war iyo madax adayg kama daalaan, mar waxay ku calaacali maa naloo soo diro dige, markuu Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) xaq ula yimidna waxay dheheen: maa wixii Nabi Muuse la siiyey oo kale la siiyo, dhabtuna waa inay ka gaaloobeen wixii Nabi Muuse la siiyey, oy kuna sheegeen isaga iyo quraanka sixir iskaalmaysan, waxaase lagu aamusiiyey laguna xujeeyey inay keenaan kitaab ka fiican hadday run sheegi, haddii kalese waa daalimiin hawadooda raacay xaq la'aan, wax badanna Alle wuu u caddeeyay dadka xaqa bal inay waano qaataan. Cigrime wuxuu yidhi: labo sixir waxay ula jeedaan Tawreed iyo Injiil. **[Al-Qasas: 48-51].**

ٱلَّذِينَ ءَاتَيْنَٰهُمُ ٱلْكِتَٰبَ مِن قَبْلِهِۦ هُم بِهِۦ يُؤْمِنُونَ ﴿٥٢﴾

52. Kuwaannu siinnay kitaabka hortiis way rumayn isaga.

وَإِذَا يُتْلَىٰ عَلَيْهِمْ قَالُوٓا۟ ءَامَنَّا بِهِۦٓ إِنَّهُ ٱلْحَقُّ مِن رَّبِّنَآ إِنَّا كُنَّا مِن قَبْلِهِۦ مُسْلِمِينَ ﴿٥٣﴾

53. Marka lagu akhriyo korkoodana waxay dhahaan waan rumaynay quraanka isaguna waa xaq Rabbigeen ka yimid, annaguna waxaan ahayn hortiis muslimiin.

أُو۟لَٰٓئِكَ يُؤْتَوْنَ أَجْرَهُم مَّرَّتَيْنِ بِمَا صَبَرُوا۟ وَيَدْرَءُونَ بِٱلْحَسَنَةِ ٱلسَّيِّئَةَ وَمِمَّا رَزَقْنَٰهُمْ يُنفِقُونَ ﴿٥٤﴾

54. Kuwaas waxaa la siiyey ajrigooda labo mar samirkoodii dartiis, waxayna raaciyaan xumaanta wanaag waxaan ku arzuqnayna waxbay ka bixiyaan.

وَإِذَا سَمِعُوا۟ ٱللَّغْوَ أَعْرَضُوا۟ عَنْهُ وَقَالُوا۟ لَنَآ أَعْمَٰلُنَا وَلَكُمْ أَعْمَٰلُكُمْ سَلَٰمٌ عَلَيْكُمْ لَا نَبْتَغِى ٱلْجَٰهِلِينَ ﴿٥٥﴾

55. Markay maqlaan hadal macno darrana way ka jeedsadaan waxayna dhahaan annagu camalkannaga yaan leennahay

idinna camalkiinna, waad salaaman tihiin ma rabno jaahiliin (waddadooda).

إِنَّكَ لَا تَهْدِى مَنْ أَحْبَبْتَ وَلَٰكِنَّ ٱللَّهَ يَهْدِى مَن يَشَآءُ ۚ وَهُوَ أَعْلَمُ بِٱلْمُهْتَدِينَ ﴿٥٦﴾

56. Adugu ma hanuunisid ciddaad jeceshahay laakiin Alle ayaa hanuuniya cidduu doono, isagaana og kuwa hanuunsan.

وَقَالُوٓا۟ إِن نَّتَّبِعِ ٱلْهُدَىٰ مَعَكَ نُتَخَطَّفْ مِنْ أَرْضِنَآ ۚ أَوَلَمْ نُمَكِّن لَّهُمْ حَرَمًا ءَامِنًا يُجْبَىٰٓ إِلَيْهِ ثَمَرَٰتُ كُلِّ شَىْءٍ رِّزْقًا مِّن لَّدُنَّا وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٥٧﴾

57. Waxay dheheen gaaladii (Makaad) haddaan raacno hanuunka waxaa nalaga dafi dhulkannaga, miyaannaan siinnin xaram aamina oo la keeno midhaha wax kasta quudin darteed oo xaggannaga ah, laakiin badankood ma oga.

Aayadahan waxay ku soo degeen kuwii rumeeyey oo ehelu kitaabka ahaa, inay rumeeyeen xaqa, muslimna ahaayeen, ajirkana loo laab laabi, xumaanta iyo warka jaahiliintana ay ka jeedsan jireen. Aayadaha kalana waxay ku soo degeen xaalkii abuudaalib Nabiga adeerkiis markuu Nabigu ka quustay, iyo in Alle uun hanuuniyo cidduu doono ee cid kale wax qaban karin, tan kalana waxay ka warrami sida Alle ugu nicmeeyey reer Makaad iyo siday xaqa u diidi, Bukhaari iyo Muslim waxay sheegeen in markuu sakaraadku qabtay Abuudaalib Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ku yidhi: adeer ashahaado aan Alle agtiisa kuugu xujeystee markaasuu yidhi: wuu cabsaday lay dhihi maayo, markaasuu dhintay. **[Al-Qasas: 52-57].**

وَكَمْ أَهْلَكْنَا مِن قَرْيَةٍۭ بَطِرَتْ مَعِيشَتَهَا ۖ فَتِلْكَ مَسَٰكِنُهُمْ لَمْ تُسْكَن مِّنۢ بَعْدِهِمْ إِلَّا قَلِيلًا ۖ وَكُنَّا نَحْنُ ٱلْوَٰرِثِينَ ﴿٥٨﴾

58. Badanaa intaan halaagnay magaalo ku kibirtay nolasheeda waana taas guryahoodii lamana degin gadaashood wax yar mooyee, annagaana ah kuwo dhaxla (hadha).

وَمَا كَانَ رَبُّكَ مُهْلِكَ ٱلْقُرَىٰ حَتَّىٰ يَبْعَثَ فِىٓ أُمِّهَا رَسُولًا يَتْلُوا۟ عَلَيْهِمْ ءَايَٰتِنَا ۚ وَمَا كُنَّا مُهْلِكِى ٱلْقُرَىٰٓ

59. Mana aha Allehaa mid halaaga magaalo intuu uga bixiyo tan hooyada u ah «caasimadda» rasuul ku akhriya korkooda

إِلَّا وَأَهۡلُهَا ظَٰلِمُونَ ٥٩

aayaadkannaga mana nihin kuwo halaaga magaalo aan ehelkeedu daalimiin ahayn.

وَمَآ أُوتِيتُم مِّن شَيۡءٖ فَمَتَٰعُ ٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَا وَزِينَتُهَاۚ وَمَا عِندَ ٱللَّهِ خَيۡرٞ وَأَبۡقَىٰٓۚ أَفَلَا تَعۡقِلُونَ ٦٠

60. Wixii laydin siiyey oo wax ah waa uun raaxada nolasha dhaw iyo quruxdeeda waxase Alle agtiisa ah yaa khayr roon oo hadhid badan (waana mid waaraya) ee miyeydaan wax kasayn.

أَفَمَن وَعَدۡنَٰهُ وَعۡدًا حَسَنٗا فَهُوَ لَٰقِيهِ كَمَن مَّتَّعۡنَٰهُ مَتَٰعَ ٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَا ثُمَّ هُوَ يَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِ مِنَ ٱلۡمُحۡضَرِينَ ٦١

61. Ruuxaan u yaboohnay yabooh fiican oo la kulmi ma la mid baa ruuxaan ugu raaxaynay nolosha dhaw markaas noqon maalinta qiyaame kuwa la soo joojin (la cadaabi).

Wax badan yuu Alle halaagay magaalo ku kibirtay nolasheeda, markaas aan la degin guryahoodii iyaga kadib wax yar mooyee, Alle umbaana u hadhay, lamana halaago ummad inta looga diro rasuul magaaladooda weyn, sidii maka, kuna akhriyo quraanka, halaagguna wuxuu ku dhacaa markay dulmi falaan. Wax kasta oo addunyo wax laysku siiyana waa uun nolol dhaw oo tagi, waxaase khayr roon oo hadhid badan wanaagga Alle agtiisa ah, waana in wax la kasaa oo la waano qaato. Mana sinna ruux wanaag loo yaboohay oo la kulmi, iyo mid wax yar loo raaxeeyey oo noqon qiyaamada kuwa loo soo taago ciqaabta. Ujeeddaduna waa in kibir iyo isla waynida macno darro layska jiro, raaxada adduunna lagu kadsoomin ee si fiican iyo sharaf iyo Alle ka yaabid lagu noolaado, illeen adduun iyo aakhiro waxay isu yihiin far bad la galiyey oo kalee siduu Nabigu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee). **[Al-Qasas: 58-61].**

وَيَوۡمَ يُنَادِيهِمۡ فَيَقُولُ أَيۡنَ شُرَكَآءِيَ ٱلَّذِينَ كُنتُمۡ تَزۡعُمُونَ ٦٢

62. Xusuuso maalinta Alle u yeedhi gaalada oo ku dhihi aaway kuwaad ila wadaajiseen ee ah kuwaad sheeganayseen (caabudayseen).

قَالَ ٱلَّذِينَ حَقَّ عَلَيۡهِمُ ٱلۡقَوۡلُ رَبَّنَا هَٰٓؤُلَآءِ ٱلَّذِينَ أَغۡوَيۡنَآ أَغۡوَيۡنَٰهُمۡ

63. Kuwii waxay dheheen uu ku sugnaaday hadalkii Alle (ciqaabtii) Allow kuwaasu

كَمَا غَوَيْنَا ۖ تَبَرَّأْنَآ إِلَيْكَ ۖ مَا كَانُوٓا۟ إِيَّانَا يَعْبُدُونَ ﴿٦٣﴾

waa kuwaan baadiyeynay, waana baadiyeynay sidaan u baadiyoownay waana isaga kaa bari yeelnay mana ahayn kuwo annaga na caabuda.

وَقِيلَ ٱدْعُوا۟ شُرَكَآءَكُمْ فَدَعَوْهُمْ فَلَمْ يَسْتَجِيبُوا۟ لَهُمْ وَرَأَوُا۟ ٱلْعَذَابَ ۚ لَوْ أَنَّهُمْ كَانُوا۟ يَهْتَدُونَ ﴿٦٤﴾

64. Waxaana loo odhan u yeedha shurukadiinna markaasay u yeedhaan mase ajiibaan (maqlaan) waxayna arkaan cadaabka markaasay qoomamoodaan (oo jecleystaan) hadday hanuuni lahaayeen (adduunyadi).

وَيَوْمَ يُنَادِيهِمْ فَيَقُولُ مَاذَآ أَجَبْتُمُ ٱلْمُرْسَلِينَ ﴿٦٥﴾

65. Xusuuso maalintaan u yeedhayno gaalada oos ku odhan Alle maxaad ugu jawaabteen rasuulladii.

فَعَمِيَتْ عَلَيْهِمُ ٱلْأَنۢبَآءُ يَوْمَئِذٍ فَهُمْ لَا يَتَسَآءَلُونَ ﴿٦٦﴾

66. Markaasay ku indho beeshay korkooda xujadii (waayeen xujo) maalintaas, waxna isma warsadaan.

فَأَمَّا مَن تَابَ وَءَامَنَ وَعَمِلَ صَٰلِحًا فَعَسَىٰٓ أَن يَكُونَ مِنَ ٱلْمُفْلِحِينَ ﴿٦٧﴾

67. Ruuxiise toobad keena oo rumeeya oo fala camal fiican wuxuu u dhaw yahay inuu noqdo kuwa liibaanay.

Maalinta qiyaamana wuu soo kulmin Alle waydiinna waxay caabudi jireen, waxayna qiran in qaarkood qaar baadiyeeyey, wayna iska fogayn inay caabudi jireen, markay u yimaaddaanna ma maqlaan, waxayna qoomamoodaan hanuun la'aantii. Markii la warsado waxay rasuulladii ku qaabileenna waxba way sheegi waayi, waxna isma warsadaan. Ciddiise toobadkeento oo wanaag fasha wuxuu u dhaw yahay in loo naxariisto. **[Al-Qasas: 62-67].**

وَرَبُّكَ يَخْلُقُ مَا يَشَآءُ وَيَخْتَارُ ۗ مَا كَانَ لَهُمُ ٱلْخِيَرَةُ ۚ سُبْحَٰنَ ٱللَّهِ وَتَعَٰلَىٰ عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿٦٨﴾

68. Allehaa wuxuu abuuraa wuxuu doono wuuna doortaa, doorasho ma leh iyagu (dadku), waa ka nasahan yahay Alle waana ka sarreeyaa waxay la wadaajin.

وَرَبُّكَ يَعْلَمُ مَا تُكِنُّ صُدُورُهُمْ وَمَا يُعْلِنُونَ ﴿٦٩﴾

69. Rabbigaana waa og yahay waxay qarin laabtoodu iyo waxay muujinba.

وَهُوَ ٱللَّهُ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ۖ لَهُ ٱلْحَمْدُ فِى ٱلْأُولَىٰ وَٱلْءَاخِرَةِ ۖ وَلَهُ ٱلْحُكْمُ وَإِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿٧٠﴾

70. Alle na waa Ilaaha isaga mooyee aan ilaah kale xaq lugu caabudin, mahad buu mutaa adduun iyo aakhiraba, xukunkana isagaa iska leh xaggiisaana loo noqon.

قُلْ أَرَءَيْتُمْ إِن جَعَلَ ٱللَّهُ عَلَيْكُمُ ٱلَّيْلَ سَرْمَدًا إِلَىٰ يَوْمِ ٱلْقِيَٰمَةِ مَنْ إِلَٰهٌ غَيْرُ ٱللَّهِ يَأْتِيكُم بِضِيَآءٍ ۖ أَفَلَا تَسْمَعُونَ ﴿٧١﴾

71. Waxaad dhahdaa bal warrama hadduu ka yeelo Alle korkiinna habeen joogta ah tan iyo qiyaamada waa kee macbuudka ka soo hadhay Ilaahay ee idiin keeni nuur, miyaydaan wax maqlayn.

قُلْ أَرَءَيْتُمْ إِن جَعَلَ ٱللَّهُ عَلَيْكُمُ ٱلنَّهَارَ سَرْمَدًا إِلَىٰ يَوْمِ ٱلْقِيَٰمَةِ مَنْ إِلَٰهٌ غَيْرُ ٱللَّهِ يَأْتِيكُم بِلَيْلٍ تَسْكُنُونَ فِيهِ ۖ أَفَلَا تُبْصِرُونَ ﴿٧٢﴾

72. Waxaadna dhahdaa bal warrama hadduu ka yeelo Alle korkiinna maalin joogta ah tan iyo qiyaamada waa kee macbuudka ka soo hadhay Ilaahay ee idiin keeni habeen aad ku xasishaan dhexdiisa, miyeydaan wax arkayn.

وَمِن رَّحْمَتِهِۦ جَعَلَ لَكُمُ ٱلَّيْلَ وَٱلنَّهَارَ لِتَسْكُنُوا۟ فِيهِ وَلِتَبْتَغُوا۟ مِن فَضْلِهِۦ وَلَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿٧٣﴾

73. Naxariistiisa waxaa ka mid ah inuu idiin yeelay habeen iyo dharaarba inaad xasishaan dhexdiisa dalabtaanna fadligiisa iyo inaad ku shugridaan.

Alle ayaa wax abuura waxna doorta, dadse wax ma doortaan, Alle na xumaan wuu ka nasahan yahay, waxa la qarin iyo waxa la muujinna waa og yahay, Alle mooyee ilaah xaq lugu caabudo ma jiro, mahad iyo xukunna isagaa iska leh adduun iyo aakhiraba. Waana Rabbiga habeen iyo maalin inoo yeelay een midna joogto ka yeelin, laakin naxariis darteed yuu habeenka iyo dharaarta inoogu yeelay si loo xasilo loona shaqeeyo, waxaa wax mudan mahad Alle, iyo cibaadadiisa. **[Al-Qasas: 68-73].**

74. Xusuuso maalintaan u yeedhayno gaalada oo Alle odhanaa aaway shurakadaydii ah kuwaad sheeganayseen.

وَيَوْمَ يُنَادِيهِمْ فَيَقُولُ أَيْنَ شُرَكَآءِىَ ٱلَّذِينَ كُنتُمْ تَزْعُمُونَ ﴿٧٤﴾

75. Waxaanna ka soo siibnaa ummad kasta markhaati waxaana ku nidhi keena xujadiinna waxayna ogaadaan in xaqa Alle leeyahay, waxaana ka dhumay xaggooda waxay been abuuran jireen.

وَنَزَعْنَا مِن كُلِّ أُمَّةٍ شَهِيدًا فَقُلْنَا هَاتُوا۟ بُرْهَٰنَكُمْ فَعَلِمُوٓا۟ أَنَّ ٱلْحَقَّ لِلَّهِ وَضَلَّ عَنْهُم مَّا كَانُوا۟ يَفْتَرُونَ ﴿٧٥﴾

76. Qaaruuunna wuxuu ka mid ahaa qoomkii (Nabi) Muuse, wuuna ku kibray korkooda, waxaanna siinnay wax furayaalkiisu ku culus tahay koox xoog badan, markay ku dheheen qoomkiisii ha farxin (kibrin), Alle ma jecla kuwa farxa «kibree».

* إِنَّ قَٰرُونَ كَانَ مِن قَوْمِ مُوسَىٰ فَبَغَىٰ عَلَيْهِمْ ۖ وَءَاتَيْنَٰهُ مِنَ ٱلْكُنُوزِ مَآ إِنَّ مَفَاتِحَهُۥ لَتَنُوٓأُ بِٱلْعُصْبَةِ أُو۟لِى ٱلْقُوَّةِ إِذْ قَالَ لَهُۥ قَوْمُهُۥ لَا تَفْرَحْ ۖ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُحِبُّ ٱلْفَرِحِينَ ﴿٧٦﴾

77. Kuna doon waxa Alle ku siiyey guriga aakhiro hana halmaamin qaybtaada adduunka samana fal sida Alle kuugu samo falay hana la doonin fasaad dhulka, Alle ma jecla fasaadiyayaashee.

وَٱبْتَغِ فِيمَآ ءَاتَىٰكَ ٱللَّهُ ٱلدَّارَ ٱلْءَاخِرَةَ ۖ وَلَا تَنسَ نَصِيبَكَ مِنَ ٱلدُّنْيَا ۖ وَأَحْسِن كَمَآ أَحْسَنَ ٱللَّهُ إِلَيْكَ ۖ وَلَا تَبْغِ ٱلْفَسَادَ فِى ٱلْأَرْضِ ۖ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُحِبُّ ٱلْمُفْسِدِينَ ﴿٧٧﴾

Haddana mar kalaa loo dhawaaqi iyagoo la warsan waxay caabudi jireen, ummad walbana waxaa laga soo saari marag oo rasuul ah, waxaana la warsan inay keenaan xujo waxayna yaqiinsadeen in xaqu Alle u sugnaaday, waxaana ka dhumay beentay abuuran jireen. Qaaruunna wuxuu ka mid ahaa qoomkii Nabi Muuse wuuse ku kibray, isagoo lahaa xoolo badan oo furayaashiisu culaysiso koox xoog badan, waxayna saaxiibadiis ugu naseexeeyeen inuusan kibrin oon faraxu ku xambaarin isla wayni, waxa Alle siiyeyna uu ku doono aakhiro, uusan halmaaminna nasiibkiisa adduunka, wanaagna falo sida Alle ugu wanaag falay, xumaan iyo fasaadna uusan dhulka la doonin, illeen Alle ma jecla xumaan wadayaasha iyo kuwa wax fasaadiyee. Faraxana lama diiddana hadduuna fudayd iyo xumaan kugu xambaarayn ee waxaa uun la rabaa wanaag iyo Alle ku xidhnaan. **[Al-Qasas: 74-77].**

78. Wuxuuna yidhi waxaa uun la ii siiyey xoolaha cilmi aan leeyahay dartii (iyo inaan mudanahay), miyuusan ogayn in Alle halaagay hortiis quruumihii kuwo ka daran xaggiisa xoogga kana badan xoola aruurin, lamana warsado dambigooda dambiilayaasha.

قَالَ إِنَّمَآ أُوتِيتُهُۥ عَلَىٰ عِلْمٍ عِندِىٓ ۚ أَوَلَمْ يَعْلَمْ أَنَّ ٱللَّهَ قَدْ أَهْلَكَ مِن قَبْلِهِۦ مِنَ ٱلْقُرُونِ مَنْ هُوَ أَشَدُّ مِنْهُ قُوَّةً وَأَكْثَرُ جَمْعًا ۚ وَلَا يُسْـَٔلُ عَن ذُنُوبِهِمُ ٱلْمُجْرِمُونَ ﴿٧٨﴾

79. Markaasuu u soo baxay qoomkiisii isagoo xarragoon waxayna dheheen kuwa dooni nolosha dhaw shallaytee hadaan leennahay waxa la siiyey Qaaruun oo kale, isagu waa nasiib wayn yahay.

فَخَرَجَ عَلَىٰ قَوْمِهِۦ فِى زِينَتِهِۦ ۖ قَالَ ٱلَّذِينَ يُرِيدُونَ ٱلْحَيَوٰةَ ٱلدُّنْيَا يَٰلَيْتَ لَنَا مِثْلَ مَآ أُوتِىَ قَٰرُونُ إِنَّهُۥ لَذُو حَظٍّ عَظِيمٍ ﴿٧٩﴾

80. Waxayna dheheen kuwii la siiyey cilmiga magaciinba'ee abaal marinta Alle ayaa u khayr roon ciddii rumaysa oo fasha camal fiican lamana waafajiyo hadalkaas saabiriinta mooyee.

وَقَالَ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْعِلْمَ وَيْلَكُمْ ثَوَابُ ٱللَّهِ خَيْرٌ لِّمَنْ ءَامَنَ وَعَمِلَ صَٰلِحًا ۚ وَلَا يُلَقَّىٰهَآ إِلَّا ٱلصَّٰبِرُونَ ﴿٨٠﴾

81. Markaasaan la goynay isagii iyo xoolihiisiiba dhulka mana helin koox uga gargaarta Alle ka sokow, mana noqonnin mid gargaarta.

فَخَسَفْنَا بِهِۦ وَبِدَارِهِ ٱلْأَرْضَ فَمَا كَانَ لَهُۥ مِن فِئَةٍ يَنصُرُونَهُۥ مِن دُونِ ٱللَّهِ وَمَا كَانَ مِنَ ٱلْمُنتَصِرِينَ ﴿٨١﴾

82. Waxayna ahaadeen kuwii doonayey meeshiisa shalay inay dhahaan waa yaabe illeen Alle ayaa u waasiciya rizqiga cidduu doono oo addoomadiisa ah kuna cidhiidhya, hadduusan Alle nagu galladaysan wuxuu nala goyn

وَأَصْبَحَ ٱلَّذِينَ تَمَنَّوْا۟ مَكَانَهُۥ بِٱلْأَمْسِ يَقُولُونَ وَيْكَأَنَّ ٱللَّهَ يَبْسُطُ ٱلرِّزْقَ لِمَن يَشَآءُ مِنْ عِبَادِهِۦ وَيَقْدِرُ ۖ لَوْلَآ أَن مَّنَّ ٱللَّهُ عَلَيْنَا لَخَسَفَ بِنَا ۖ وَيْكَأَنَّهُۥ لَا يُفْلِحُ ٱلْكَٰفِرُونَ ﴿٨٢﴾

lahaa (dhulka), waa yaab ma liibaanto gaalo.

Muxuuse ku jawaabay markii la waaniyey, wuxuu sheegay in xoolaha loo siiyey cilmigiisa iyo wanaaggiisa, laakiin ha ogaado in Alle halaagay hortiis qarniyo ka xoog badan kana xoolo iyo dad badan, dambiilana lama idan warsado, wuuse soo baxay isagoo xarragoon, markaasay jeclaadeen kuwii adduunka doonayey inay isagoo kale noqdaan, kuwiise cilmiga lahaa waxay dheheen magaciisba'ee wanaagga Alle yaa u fiican ciddii sama fasha, dhulkaase lala gooyey qaaruun iyo guryihiisiiba wax u gargaarana ma helin, isna isuma gargaarin, markaasay kuwii jeclaa wixiisoo kale shalay dheheen yaab weeyee illeen rizqiga wuxuu ku jiraa awoodda Alle, waasicin iyo cidhiidhiba, waxayna sheegeen in haddaan Alle u naxariisan lala goyn lahaa dhulka, waxayna ogaadeen inayna gaalo liibaanayn. Wana kaas cidhibta kibirka iyo xoolaha sida xun loogu dhaqmo. Xooluhuse waa wanaag haddii Alle laga yaabo oo lagu samo falo. **[Al-Qasas: 78-82].**

تِلْكَ ٱلدَّارُ ٱلْآخِرَةُ نَجْعَلُهَا لِلَّذِينَ لَا يُرِيدُونَ عُلُوًّا فِى ٱلْأَرْضِ وَلَا فَسَادًا ۚ وَٱلْعَٰقِبَةُ لِلْمُتَّقِينَ ﴿٨٣﴾

83. Taasi waa daartii aakhiro waxaanna u yeelnay kuwaan doonayn isla sarraynta (kibirka) dhulka iyo fasaad, cidhibta (fiicanna) waxaa leh kuwa dhawrsada.

مَن جَآءَ بِٱلْحَسَنَةِ فَلَهُۥ خَيْرٌ مِّنْهَا ۖ وَمَن جَآءَ بِٱلسَّيِّئَةِ فَلَا يُجْزَى ٱلَّذِينَ عَمِلُوا۟ ٱلسَّيِّـَٔاتِ إِلَّا مَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿٨٤﴾

84. Ciddii la timaadda wanaag wuxuu mudan wax ka khayr roon, ciddiise la timaadda xumaan lagama abaal mariyo kuwa xumaanta sameeya waxaan waxay faleen ahayn.

إِنَّ ٱلَّذِى فَرَضَ عَلَيْكَ ٱلْقُرْءَانَ لَرَآدُّكَ إِلَىٰ مَعَادٍ ۚ قُل رَّبِّىٓ أَعْلَمُ مَن جَآءَ بِٱلْهُدَىٰ وَمَنْ هُوَ فِى ضَلَٰلٍ مُّبِينٍ ﴿٨٥﴾

85. Allaha kugu faral yeelay quraan ka wuxuu kuu soo celin meeshii ballanka (qiyaamada ama maka), waxaad dhahdaa Rabbigay baa og ruuxii la yimid hanuun iyo kan ku sugan baadi cad.

وَمَا كُنتَ تَرْجُوٓا۟ أَن يُلْقَىٰٓ إِلَيْكَ ٱلْكِتَٰبُ إِلَّا رَحْمَةً مِّن رَّبِّكَ ۖ فَلَا تَكُونَنَّ ظَهِيرًا لِّلْكَٰفِرِينَ ﴿٨٦﴾

86. Mana aadan ahayn mid rajayn in lagugu soo dejiyo kitaabka, hasa yeeshee waa naxariista Allehaa ee ha noqonnin mid u kaalmeeya gaalada.

87. Yeyna kaa leexin aayaadka Alle intii lagugu soo dejiyey ka dib uguna yeedh xagga Allehaa, hana ka mid noqonnin mushrikiinta.

وَلَا يَصُدُّنَّكَ عَنْ ءَايَٰتِ ٱللَّهِ بَعْدَ إِذْ أُنزِلَتْ إِلَيْكَ ۖ وَٱدْعُ إِلَىٰ رَبِّكَ ۖ وَلَا تَكُونَنَّ مِنَ ٱلْمُشْرِكِينَ ﴿٨٧﴾

88. Hana caabudin Alle la jirkiisa ilaah kale, Allaah mooyee ilaah (kalana) xaq luguma caabudo, wax kasta wuu halaagsami (tagi) Alle mooyee, xukunkana isagaa iska leh, xaggiisaana laydiin celin.

وَلَا تَدْعُ مَعَ ٱللَّهِ إِلَٰهًا ءَاخَرَ ۘ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ۚ كُلُّ شَىْءٍ هَالِكٌ إِلَّا وَجْهَهُۥ ۚ لَهُ ٱلْحُكْمُ وَإِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿٨٨﴾

Aayadahanna waxay sheegi in daarta aakhiro loo yeelay kuwaan iskibrin islana waynayn, xumaanna dhulka ku marin, cidhibta fiicanna waxaa mudan kuwa dhawrsada, wanaaggana mid ka fiican yaa lagu abaal mariyaa, xumaantana waxaa uun lagu abaal mariyaa waxay fali jireen. Alle na wuxuu Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) u yaboohay wanaag iyo inuu meel fiican u soo celin ama jannada ha ahaato ama mako ha ahaatee, Alle ayaana og cidda hanuunsan iyo tan baadida ah, Nabiguna ma rajaynayn waxyi intaan lagu soo dejinnin quraanka. Gaalana wax loo kaalmeeyo ma aha, iyo inay kaa leexiyaan aayaadka Alle inta lagugu soo dejiyey, gaalana wax laga mid noqdo ma aha, Alle ayaana xaq ah oo xaggiisa loo noqon, Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: hadalka ugu runsan ee shaacir yidhi waa hadalkii Labiid; wax kasta oo Ilaahay ka soo hadhay way tagi. Suuradduna waxay soo socoto oy marba hab u warrantana waxay ku dhamaatay: inaan la kibrin, wanaagga la falo, Alle u soo celin Nabiga meel uu jecel yahay, inaan gaalo loo kaalmayn, lagana mid noqon, Alle kaliyana la caabudo, wixii ka soo hadhayna tagi, xukumkuna isaga u ahaan, loona noqon isaga. **[Al-Qasas: 83-88].**

Suurat Al-Cankabuut

سُورَةُ ٱلْعَنكَبُوتِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxay ku tusin mucjisada quraanka (sida la soo sheegay).

الٓمٓ ﴿١﴾

2. Ma wuxuu u maleeyey dadku in loogaga tagi inay dhahaan waan rumeynay oon la imtixaamayn.

أَحَسِبَ ٱلنَّاسُ أَن يُتْرَكُوٓاْ أَن يَقُولُوٓاْ ءَامَنَّا وَهُمْ لَا يُفْتَنُونَ ﴿٢﴾

3. Dhab ahaan yaan u imtixaannay kuwii ka horreeyay, Alle na wuu ogaan kuwii run sheegay, wuxuuna ogaan kuwa beenlowga ah.

وَلَقَدْ فَتَنَّا ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْۖ فَلَيَعْلَمَنَّ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ صَدَقُواْ وَلَيَعْلَمَنَّ ٱلْكَٰذِبِينَ ﴿٣﴾

4. Mise waxay u maleeyeen kuwii xumaanta samaynayey inay naga dheereyn (carari), waxaa xun waxay xukumi.

أَمْ حَسِبَ ٱلَّذِينَ يَعْمَلُونَ ٱلسَّيِّـَٔاتِ أَن يَسْبِقُونَاۚ سَآءَ مَا يَحْكُمُونَ ﴿٤﴾

5. Ruuxii rajayn (ka cabsan) la kulanka Alle, ajashii Alle (uu qadaray) way imaan, Alle na waa maqle oge ah.

مَن كَانَ يَرْجُواْ لِقَآءَ ٱللَّهِ فَإِنَّ أَجَلَ ٱللَّهِ لَءَاتٖۚ وَهُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْعَلِيمُ ﴿٥﴾

6. Ruuxii dadaala wuxuu uun u dadaalay naftiisa, Alle na waa ka kaaftoon yahay caalamka.

وَمَن جَٰهَدَ فَإِنَّمَا يُجَٰهِدُ لِنَفْسِهِۦٓۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَغَنِيٌّ عَنِ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٦﴾

7. Kuwa (xaqa) rumeeyey camal fiicanna falay waxaan asturaynaa xumaantooda, waxaanna ka abaalmarinaynaa kii u fiicnaa ay camalfali jireen.

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ لَنُكَفِّرَنَّ عَنْهُمْ سَيِّـَٔاتِهِمْ وَلَنَجْزِيَنَّهُمْ أَحْسَنَ ٱلَّذِى كَانُواْ يَعْمَلُونَ ﴿٧﴾

Adduunku waa guri imtixaan iyo shaqo, mana suurowdo in cidna lagu dhaafo inuu sheegto wanaag iyo xaq rumeyn imtixaan la'aan, taasina waa sunnada Alle oo kuwii horaba wuu imtixaanay, wuuna ogaan ciddii run sheegi iyo tii been sheegiba, cid ka fakanna ma jirto. Rasuulkuna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): dadka waxaa ugu daran imtixaan anbiyada, kuwa suubban iyo midba midkuu ka fiican yahay, ruuxana waa la imtixaami inta diintiisu tahay hadday diintiisu adag tahay imtixaamkaa lagu badiyaa. Tirmidi, Ibnumaajah. Waa saxiix.

Wuxuu Alle qaddarana wuu imaan ee waa in wanaagga lagu dadaalo, illeen cid walba waxaa laga abaalmarin waxay la timaade xumaan iyo samaanba. Xasan Albasri wuxuu yidhi: ruuxu mujaahid buu noqon karaa isagoon maalinna seef wax ku dhufannin. **[Al-Cankabuut: 1-7].**

8. Waxaan u dardaarannay dadka labadiisii waalid wanaagfalkooda, hadday kugula dadalaan inaad ila wadaajiso waxaadan cilmi u lahayn (gaalowdo) ha ku adeecin, xaggayga unbaa laydiin soo celin, waxaana idiinka warrami (abaalna marin) waxaad camalfali jirteen.

وَوَصَّيْنَا ٱلْإِنسَٰنَ بِوَٰلِدَيْهِ حُسْنًا ۖ وَإِن جَٰهَدَاكَ لِتُشْرِكَ بِى مَا لَيْسَ لَكَ بِهِۦ عِلْمٌ فَلَا تُطِعْهُمَآ ۚ إِلَىَّ مَرْجِعُكُمْ فَأُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٨﴾

9. Kuwiise (xaqa) rumeeyey camal fiicanna falay waxaan dhexgalinaynaa kuwa suubban (jannada).

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ لَنُدْخِلَنَّهُمْ فِى ٱلصَّٰلِحِينَ ﴿٩﴾

10. Dadka waxaa ka mid ah ruux dhihi waxaan rumeynay Alle, markii lagu dhibo Alle dartiisna ka yeela imtixaamka dadka (dhibkooda) cadaabka Alle oo kale, hadday timaado guul xagga Alle ka ahaatay waxay dhahaan annagu waan idin la jirnay, Alle miyuusan ahayn kan og waxa laabta dadka ku jira.

وَمِنَ ٱلنَّاسِ مَن يَقُولُ ءَامَنَّا بِٱللَّهِ فَإِذَآ أُوذِىَ فِى ٱللَّهِ جَعَلَ فِتْنَةَ ٱلنَّاسِ كَعَذَابِ ٱللَّهِ ۖ وَلَئِن جَآءَ نَصْرٌ مِّن رَّبِّكَ لَيَقُولُنَّ إِنَّا كُنَّا مَعَكُمْ ۚ أَوَلَيْسَ ٱللَّهُ بِأَعْلَمَ بِمَا فِى صُدُورِ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿١٠﴾

وَلَيَعْلَمَنَّ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَلَيَعْلَمَنَّ ٱلْمُنَٰفِقِينَ ﴿١١﴾

11. Dhab ahaan yuu u ogaan Alle kuwa xaqa rumeeyey, dhab ahaanna wuxuu u ogaan kuwa munaafiqiinta ah.

وَقَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لِلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱتَّبِعُواْ سَبِيلَنَا وَلْنَحْمِلْ خَطَٰيَٰكُمْ وَمَا هُم بِحَٰمِلِينَ مِنْ خَطَٰيَٰهُم مِّن شَىْءٍ ۖ إِنَّهُمْ لَكَٰذِبُونَ ﴿١٢﴾

12. Waxay ku dhaheen kuwii gaaloobay kuwii xaqa rumeeyey raaca waddadannada aan xambaarno gafafkiinnee, mana aha kuwo xambaari wax gafafkooda ka mid ah, ee waa beenaalayaal.

وَلَيَحْمِلُنَّ أَثْقَالَهُمْ وَأَثْقَالًا مَّعَ أَثْقَالِهِمْ ۖ وَلَيُسْـَٔلُنَّ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ عَمَّا كَانُواْ يَفْتَرُونَ ﴿١٣﴾

13. Waxayse dhab ahaan u xambaari culaysyaalkooda iyo culaysyo culaysyadoodii la jira, waxaana dhab ahaan loo warsan maalinta qiyaame waxay been abuuran jireen.

Waalidkaa isagaa sabab u ahaa jiritaankaaga Alle ka sokow, wuuna kugu dhibtooday siduu kuu korin lahaa, abaalkiisuna waa wanaag iyo samo fal hadduusan gaalnimo ku farin oon lagu adeeceyn illeen Alle ayaa loo noqone, ciddii wanaag fashana kuwa wanaagsan yuu jannada la gali. Alle na wax ka qarsoon ma jiro wuuna og yahay kuwa markii la dhibana diinta ka taga, markii guul la helana ku soo dhawaada, wuxuuna og yahay mu'minka dhabta ah iyo munaafaqaba. Cid cid kale dambi ka xambaarina ma jirto ee wuxuu xambaari ruux walba dambigiisii iyo kii dhumintiisa. Waxaa sugnaaday ruuxii hanuun ugu yeedha wuxuu mudan ajriga kuwa uu u yeedhay oo kale ee raacay tan iyo qiyaamada iyadoon iyana waxba laga nusqaaminayn ajrigooda, ruuxii u yeedha baadina, waxaa korkiisa ah dambiga kuwii ku raacay tan iyo qiyaamada iyadoon laga nusqaaminayn iyana dambigoodii waxba. **[Al-Cankabuut: 8-13].**

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا نُوحًا إِلَىٰ قَوْمِهِۦ فَلَبِثَ فِيهِمْ أَلْفَ سَنَةٍ إِلَّا خَمْسِينَ عَامًا فَأَخَذَهُمُ ٱلطُّوفَانُ وَهُمْ ظَٰلِمُونَ ﴿١٤﴾

14. Dhab ahaan baan ugu dirray (Nabi) Nuux qoomkiisii, wuxuuna ku dhex nagaaday kun sano oo kontan la' waxaana qabtay duufaankii (halaaggii biyaha) iyagoo daalimiin ah.

فَأَنجَيْنَٰهُ وَأَصْحَٰبَ ٱلسَّفِينَةِ وَجَعَلْنَٰهَآ ءَايَةً لِّلْعَٰلَمِينَ ﴿١٥﴾

15. Waana korinnay Nuux iyo dadkii doonta, waxaanna ka yeellay aayad (uu ku waantoomo) caalamku.

وَإِبْرَٰهِيمَ إِذْ قَالَ لِقَوْمِهِ ٱعْبُدُواْ ٱللَّهَ وَٱتَّقُوهُ ۖ ذَٰلِكُمْ خَيْرٌ لَّكُمْ إِن كُنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿١٦﴾

16. (Nabi) Ibraahimna (waa dirnay) wuxuuna ku yidhi qoomkiisii: caabuda Alle kana dhawrsada saasaa idiin khayr badane haddaad wax ogtihiin.

إِنَّمَا تَعْبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ أَوْثَٰنًا وَتَخْلُقُونَ إِفْكًا ۚ إِنَّ ٱلَّذِينَ تَعْبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ لَا يَمْلِكُونَ لَكُمْ رِزْقًا فَٱبْتَغُواْ عِندَ ٱللَّهِ ٱلرِّزْقَ وَٱعْبُدُوهُ وَٱشْكُرُواْ لَهُۥٓ ۖ إِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿١٧﴾

17. Waxaad uun caabudaysaan Alle ka sokow sanamyo, waxaadna abuuraysaan been, kuwaad caabudaysaan Alle ka sokow idiinma hantaan wax rizqi ah ee ka dalba Alle agtiisa rizqiga, caabudana kuna mahdiya xaggiisaa laydiin celine.

وَإِن تُكَذِّبُواْ فَقَدْ كَذَّبَ أُمَمٌ مِّن قَبْلِكُمْ ۖ وَمَا عَلَى ٱلرَّسُولِ إِلَّا ٱلْبَلَٰغُ ٱلْمُبِينُ ﴿١٨﴾

18. Haddaad beenisaan (xaqa) waxaa beeniyey ummado idinka horreeyey Rasuulkana ma saarra waxaan gaadhsiin cad ahayn.

Meelo badan yuu Alle ku soo celceliyey qisada Nabiyada iyo dadkii loo diray si loogu waano qaato, halkanna waxay aayaduhu caddayn in Nabi Nuux ku dhex noolaa qoomkiisii muddadaas dheer xaqana ugu yeedhayey beeniyeenna lana halaagay isaga iyo intii doonta kula jirtay mooyee. Sidoo kale Nabi Ibraahim isna Alle ayaa u diray qoomkiisii, wuxuuna ugu yeedhay inay Alle kaliya caabudaan rizqigana ka doonaan kuna mahdiyaan waxa isaga ka soo hadhayna ay iskaga tagaan, ciddii xaqa beenisana waxay la mid noqon kuwii horay xaqa u beeniyey ee la halaagay. Nabigana waxaa uun korkiisa ah caddaynta xaqa iyo ugu yeedhiddiisa. **[Al-Cankabuut: 14-18].**

أَوَلَمْ يَرَوْاْ كَيْفَ يُبْدِئُ ٱللَّهُ ٱلْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُۥٓ ۚ إِنَّ ذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ يَسِيرٌ ﴿١٩﴾

19. Miyeyna arkayn sida Alle u billaabay (abuuridda) khalqiga una soo celin, arrintaasna Alle waa u fududdahay.

قُلْ سِيرُواْ فِى ٱلْأَرْضِ فَٱنظُرُواْ كَيْفَ

20. Waxaad dhahdaa socda dhulka oo daya sida Alle u billaabay

khalqiga, haddana Alle u ahaysiin abuuridda dambe (soo bixinta), Alle na wax walba wuu karaa.

بَدَأَ ٱلۡخَلۡقَۚ ثُمَّ ٱللَّهُ يُنشِئُ ٱلنَّشۡأَةَ ٱلۡأٓخِرَةَۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَيۡءٖ قَدِيرٞ ٢٠

21. Wuxuu cadaabaa cidduu doono wuxuuna u naxariistaa cidduu doono, xaggiisaana laydiin celin.

يُعَذِّبُ مَن يَشَآءُ وَيَرۡحَمُ مَن يَشَآءُۖ وَإِلَيۡهِ تُقۡلَبُونَ ٢١

22. Idinkuna ma tihidin kuwa Alle ku daaliya dhulka iyo samada midna, wax Alle ka soo hadhay oo idiin sokeeya ah ama idiin gargaarina ma jiro.

وَمَآ أَنتُم بِمُعۡجِزِينَ فِي ٱلۡأَرۡضِ وَلَا فِي ٱلسَّمَآءِۖ وَمَا لَكُم مِّن دُونِ ٱللَّهِ مِن وَلِيّٖ وَلَا نَصِيرٖ ٢٢

23. Kuwii ka gaaloobay aayaadka Alle iyo la kulankiisa kuwaasi waxay ka quusteen naxariistayda waxaana kuwaas u sugnaaday cadaab daran.

وَٱلَّذِينَ كَفَرُواْ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ وَلِقَآئِهِۦٓ أُوْلَٰٓئِكَ يَئِسُواْ مِن رَّحۡمَتِي وَأُوْلَٰٓئِكَ لَهُمۡ عَذَابٌ أَلِيمٞ ٢٣

24. Jawaabtii qoomkiisuna waxaan ahayn dila ama guba ma ahayn, markaasaa Alle ka koriyey dabkii, arrintaasna waano yaa ugu sugan ciddii wax rumeyn.

فَمَا كَانَ جَوَابَ قَوۡمِهِۦٓ إِلَّآ أَن قَالُواْ ٱقۡتُلُوهُ أَوۡ حَرِّقُوهُ فَأَنجَىٰهُ ٱللَّهُ مِنَ ٱلنَّارِۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَأٓيَٰتٖ لِّقَوۡمٖ يُؤۡمِنُونَ ٢٤

25. Wuxuuna ku yidhi (Nabi Ibraahim) waxaad yeelateen Alle ka sokow sanamyaal jacayl dhexdiinna ah dartiis nolosha adduunyo, maalinta qiyaamese wuu diidi qaarkiin qaarka kale lacanadina qaarkiin qaarka kale, hoygiinnuna waa naarta, wax idiin gargaarina idiin ma sugnaan.

وَقَالَ إِنَّمَا ٱتَّخَذۡتُم مِّن دُونِ ٱللَّهِ أَوۡثَٰنٗا مَّوَدَّةَ بَيۡنِكُمۡ فِي ٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَاۖ ثُمَّ يَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِ يَكۡفُرُ بَعۡضُكُم بِبَعۡضٖ وَيَلۡعَنُ بَعۡضُكُم بَعۡضٗا وَمَأۡوَىٰكُمُ ٱلنَّارُ وَمَا لَكُم مِّن نَّٰصِرِينَ ٢٥

Ruuxii caqli leh waa inuu fikiraa sida Alle wax u abuuray iyo siduu u karo inuu u soo celiyo una fududdahay, dhulkana waa in la maraa si loo arko abuurka Alle iyo qudradiisa. Caabudid, naxariis, gargaar iyo awooddana Alle ayaa iska leh, ee waa in la rumeeyaa aayaadkiisa iyo la kulankiisa si loo helo naxariistiisa, cadaabkiisana looga koro.

Bal day Nabi Ibraahim siday ugu jawaabeen qoomkiisii oy dheheen dila dabna ay ku tuureen markuu ugu yeedhay cibaadada Alle iyo inay ka tagaan sanamyada ay isku jecel yihiin nolosha adduunyo, hadhow qiyaamadase ay kala carari qaarna qaar nacladi wax u gargaarina ayna helayn. Waana taas sida dhabta ah oo ah in inta xumaanta isku jeclaata nolosha adduunyo is nici doonaan maalinta qiyaame. **[Al-Cankabuut: 19-25].**

26. Waxaa rumeeyey Nabi Ibraahim (Nabi) Luud wuxuuna yidhi Nabi Ibraahim waxaan u hijroon Allehay illeen waa adkaade falsane.

* فَـَٔامَنَ لَهُۥ لُوطٞۘ وَقَالَ إِنِّي مُهَاجِرٌ إِلَىٰ رَبِّيٓۖ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلۡعَزِيزُ ٱلۡحَكِيمُ ٢٦

27. Waxaanna siinnay Isxaaq iyo Yacquub waxaanna yeelnay faraciisii Nabinnimo iyo kitaab (loo soo dajiyey) waxaanna siinney ajrigiisii adduunyada dhexdeeda aakhirana wuxuu ka mid noqon kuwa suubban.

وَوَهَبۡنَا لَهُۥٓ إِسۡحَٰقَ وَيَعۡقُوبَ وَجَعَلۡنَا فِي ذُرِّيَّتِهِ ٱلنُّبُوَّةَ وَٱلۡكِتَٰبَ وَءَاتَيۡنَٰهُ أَجۡرَهُۥ فِي ٱلدُّنۡيَاۖ وَإِنَّهُۥ فِي ٱلۡأٓخِرَةِ لَمِنَ ٱلصَّٰلِحِينَ ٢٧

28. «Nabi» Luudna «xusuuso» markuu ku yidhi qoomkiisii waxaad la timaadeen xumaan aan cidna idiinka hormarin adduunyada.

وَلُوطًا إِذۡ قَالَ لِقَوۡمِهِۦٓ إِنَّكُمۡ لَتَأۡتُونَ ٱلۡفَٰحِشَةَ مَا سَبَقَكُم بِهَا مِنۡ أَحَدٖ مِّنَ ٱلۡعَٰلَمِينَ ٢٨

29. Idinku ma waxaad u tagaysaan ragga ood goynaysaan jidka kulana imaanaysaan naadigiinna wax la naco, mana noqonnin qoomkiisii jawaabtoodii inay dhahaan noo keen cadaabka Alle haddaad ka mid tahay runlayaasha mooyee.

أَئِنَّكُمۡ لَتَأۡتُونَ ٱلرِّجَالَ وَتَقۡطَعُونَ ٱلسَّبِيلَ وَتَأۡتُونَ فِي نَادِيكُمُ ٱلۡمُنكَرَۖ فَمَا كَانَ جَوَابَ قَوۡمِهِۦٓ إِلَّآ أَن قَالُواْ ٱئۡتِنَا بِعَذَابِ ٱللَّهِ إِن كُنتَ مِنَ ٱلصَّٰدِقِينَ ٢٩

30. Wuxuuna yidhi Allow iiga gargaar qoomka wax fasaadiya.

قَالَ رَبِّ ٱنصُرۡنِي عَلَى ٱلۡقَوۡمِ ٱلۡمُفۡسِدِينَ ٣٠

31. Markay ula timid farriintannadii (malaa'igtii) Nabi Ibraahim

وَلَمَّا جَآءَتۡ رُسُلُنَآ إِبۡرَٰهِيمَ بِٱلۡبُشۡرَىٰ

bishaaro waxay dhaheen annagu waxaan halaagaynaa ehelka magaaladan, ehelkeedu waa daalimiine.

قَالُوٓاْ إِنَّا مُهۡلِكُوٓاْ أَهۡلِ هَٰذِهِ ٱلۡقَرۡيَةِۖ إِنَّ أَهۡلَهَا كَانُواْ ظَٰلِمِينَ ٣١

32. Wuxuu yidhi (Nabi Ibraahim): waxaa ku sugan Luud, waxay dhaheen: annagaa og cidda dhexdeeda ah waannu korinaynaa Luud iyo ehelkiisa haweenaydiisa mooyee oo noqon kuwa halaagga ku hadhi.

قَالَ إِنَّ فِيهَا لُوطٗاۚ قَالُواْ نَحۡنُ أَعۡلَمُ بِمَن فِيهَاۖ لَنُنَجِّيَنَّهُۥ وَأَهۡلَهُۥٓ إِلَّا ٱمۡرَأَتَهُۥ كَانَتۡ مِنَ ٱلۡغَٰبِرِينَ ٣٢

Qisada Nabi Luudh iyo qoomkiisa wax badan bay ku soo noqnoqotay quraanka. Waxayna samayn jireen xumaan laga xishoodo iyo akhlaaq xun.

Tan kale waxay ku tusin aayaduhu hijradii Nabi Ibraahim iyo sidii Alle u barakeeyey faraciisa iyo naxariis badnidiisii, iyo inaan nafna naf kale dambigeeda qaadayn sidii haweeneydii Nabi Luudba. **[Al-Cankabuut: 26-32].**

33. Markay rasuulladannadii (malaa'igtii) u timid Luud wuu ka tiiraanyooday wuuna la cidhiidhyamay waxayna ku dhaheen ha cabsan hana tiiraanyoon waannu ku korin adiga iyo ehelkaagabee haweenaydaada mooyee oo noqon kuwa la halaagi.

وَلَمَّآ أَن جَآءَتۡ رُسُلُنَا لُوطٗا سِيٓءَ بِهِمۡ وَضَاقَ بِهِمۡ ذَرۡعٗاۖ وَقَالُواْ لَا تَخَفۡ وَلَا تَحۡزَنۡ إِنَّا مُنَجُّوكَ وَأَهۡلَكَ إِلَّا ٱمۡرَأَتَكَ كَانَتۡ مِنَ ٱلۡغَٰبِرِينَ ٣٣

34. Waxaannu ku soo dajin magaalada dadkeeda dhagaxyo (naareed) oo samada ka yimid faasiqnimadooda darteed.

إِنَّا مُنزِلُونَ عَلَىٰٓ أَهۡلِ هَٰذِهِ ٱلۡقَرۡيَةِ رِجۡزٗا مِّنَ ٱلسَّمَآءِ بِمَا كَانُواْ يَفۡسُقُونَ ٣٤

35. Waxaannu kaga tagnay magaaladaa calaamad u muuqata qoomkii wax kasi.

وَلَقَد تَّرَكۡنَا مِنۡهَآ ءَايَةَۢ بَيِّنَةٗ لِّقَوۡمٖ يَعۡقِلُونَ ٣٥

36. Reer madyanna (waxaannu u dirnay) walaalkood (Nabi) Shucayb wuxuuna ku yidhi qoomkayow caabuda Alle,

وَإِلَىٰ مَدۡيَنَ أَخَاهُمۡ شُعَيۡبٗا فَقَالَ يَٰقَوۡمِ ٱعۡبُدُواْ ٱللَّهَ وَٱرۡجُواْ ٱلۡيَوۡمَ ٱلۡأٓخِرَ وَلَا تَعۡثَوۡاْ فِي ٱلۡأَرۡضِ مُفۡسِدِينَ ٣٦

rajeeyana (ka yaaba) maalintii dambaysay hana la soconnina dhulka fasaadin.

37. Markaasay beeniyeen waxaana qabtay gariir (iyo qaylo) waxayna noqdeen kuwo lawyaha u dhaca.

فَكَذَّبُوهُ فَأَخَذَتْهُمُ ٱلرَّجْفَةُ فَأَصْبَحُواْ فِي دَارِهِمْ جَٰثِمِينَ ﴿٣٧﴾

38. Caad iyo Thamuudna (waa halaagnay), «halaaggooduna» wuxuu idiinka muuqdaa guryahodii, wuxuuna u qurxiyey shaydaan camalkoodi. Wuxuuna ka leexiyey jidka waxayna ahaayeen kuwo wax arka (hadday waantoobi).

وَعَادًا وَثَمُودَاْ وَقَد تَّبَيَّنَ لَكُم مِّن مَّسَٰكِنِهِمْۖ وَزَيَّنَ لَهُمُ ٱلشَّيْطَٰنُ أَعْمَٰلَهُمْ فَصَدَّهُمْ عَنِ ٱلسَّبِيلِ وَكَانُواْ مُسْتَبْصِرِينَ ﴿٣٨﴾

Martidoo la sharrifo waa dabeecad fiican oo islaannimo, sidoo kale iyana waxaa fiican isu bishaaraynta iyo cabsida iyo murugta oo dadka laga fududeeyo, markaas ka dib waxay aayaduhu ka warrameen qoomkii Nabi Luud, Shuceyb, iyo reer Caad iyo Thamuud iyo waxay ku dambeeyeen iyo waxay la yimaadeen oo xumaan ah. Waxaana warkooda lagu faahfaahiyey meela kale, waxaase loo baahan yahay uun in laga dheeraado jidkoodii xumaa wanaaggana lagu dadaalo. **[Al-Cankabuut: 33-38].**

39. Qaaruun, Fircoon iyo Haamaanna (waa la halaagay), dhab ahaanna wuxuu ugula yimid (Nabi) Muuse xujooyin wayna isku kibriyen dhulka, mana aha kuwo naga dheereyn (carari) kara.

وَقَٰرُونَ وَفِرْعَوْنَ وَهَٰمَٰنَۖ وَلَقَدْ جَآءَهُم مُّوسَىٰ بِٱلْبَيِّنَٰتِ فَٱسْتَكْبَرُواْ فِي ٱلْأَرْضِ وَمَا كَانُواْ سَٰبِقِينَ ﴿٣٩﴾

40. Dhammaantood waxaan u qabannay dambigooda, waxaa ka mid ah mid aan ku dirnay, dabayl dhagax wadata, waxaa ka mid ah miday qabatay qaylo, waxaa ka mid ah midaan la goynay dhulka, waxaa ka mid ah midaan maanshaynay, Alle na ma aha

فَكُلًّا أَخَذْنَا بِذَنۢبِهِۦۖ فَمِنْهُم مَّنْ أَرْسَلْنَا عَلَيْهِ حَاصِبًا وَمِنْهُم مَّنْ أَخَذَتْهُ ٱلصَّيْحَةُ وَمِنْهُم مَّنْ خَسَفْنَا بِهِ ٱلْأَرْضَ وَمِنْهُم مَّنْ أَغْرَقْنَاۚ وَمَا كَانَ ٱللَّهُ لِيَظْلِمَهُمْ وَلَٰكِن كَانُوٓاْ أَنفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ ﴿٤٠﴾

kii dulmiya hasa yeeshee iyagaa naftooda dulmiyey.

مَثَلُ ٱلَّذِينَ ٱتَّخَذُوا۟ مِن دُونِ ٱللَّهِ أَوْلِيَآءَ كَمَثَلِ ٱلْعَنكَبُوتِ ٱتَّخَذَتْ بَيْتًا ۖ وَإِنَّ أَوْهَنَ ٱلْبُيُوتِ لَبَيْتُ ٱلْعَنكَبُوتِ ۚ لَوْ كَانُوا۟ يَعْلَمُونَ ﴿٤١﴾

41. Kuwii yeeshay Alle ka sokow awliyo (sokeeye u gargaara) waxay la mid yihiin caaro yeelatay guri waxaana ugu xun guri guri caaro hadday wax ogyihiin.

إِنَّ ٱللَّهَ يَعْلَمُ مَا يَدْعُونَ مِن دُونِهِۦ مِن شَىْءٍ ۚ وَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿٤٢﴾

42. Alle waa og yahay waxay baryayaan (caabudayaan) oo isaga ka soo hadhay, Alle na waa adkaade falsan.

وَتِلْكَ ٱلْأَمْثَٰلُ نَضْرِبُهَا لِلنَّاسِ ۖ وَمَا يَعْقِلُهَآ إِلَّا ٱلْعَٰلِمُونَ ﴿٤٣﴾

43. Taasina waa tusaale aannu u yeelayno dadka, wax kasi oon ahayn kuwa wax yaqaanna ma jiro.

Alle dulmilowga wuu sugaa markuuse qabto ma fakiyo siduu ku falay dulmiilayaashii xaqa iyo Nabiyada beeniyey islana weynaaday sidii Qaaruun, Fircoon, iyo Haamaan iyo qoomkii Nabi Luud, Nabi Nuux iyo Nabi Saalix iyo wixii la mid ah dhammaantood, waana la halaagay dambigooda dartiis, waxayna ku tusin in xumaan cidhibteed tahay halaag, Allana cidna ma dulmiyo iyagaase is dulmiya dadku. Ruuxiise waxaan Alle ahayn caabuda wuxuu la mid yahay caaro guri dhoob dhoobtay oon waxba u tarayn, Allaah ayaase ah mid la caabudo awoodna leh, waxaase arrintaas kasi kuwa caqliga iyo cilmiga leh. Waxaa laga wariyey Camar binu Murrata inuu yidhi: markaan maro aayad kitaabka Alle ka mid ah oonan garanayn way i walbahaarisaa illeen Alle ayaa yidhi: (ma kasaan kuwa cilmiga leh mooyee). Waxaa wariyey Ibnu abii Xaatim. **[Al-Cankabuut: 39-43].**

خَلَقَ ٱللَّهُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ بِٱلْحَقِّ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَةً لِّلْمُؤْمِنِينَ ﴿٤٤﴾

44. Alle ayaa u abuuray samooyinka iyo dhulka si xaq ah, arrintaasna calaamaa ugu sugan mu'miniinta.

ٱتْلُ مَآ أُوحِىَ إِلَيْكَ مِنَ ٱلْكِتَٰبِ وَأَقِمِ ٱلصَّلَوٰةَ ۖ إِنَّ ٱلصَّلَوٰةَ تَنْهَىٰ عَنِ ٱلْفَحْشَآءِ وَٱلْمُنكَرِ ۗ وَلَذِكْرُ ٱللَّهِ أَكْبَرُ ۗ وَٱللَّهُ يَعْلَمُ مَا تَصْنَعُونَ ﴿٤٥﴾

45. Akhri (Nabiyow) waxa luguu waxyoon oo kitaabka ah oog salaaddana, maxaa yeelay salaaddu waxay ka reebtaa (dadka) xumaanta iyo waxa la

noco, xusidda Alle ayaana weyn, Alle na waa og yahay waxaad sanceyneysaan.

46. Hakula murmina ehelu kitaabka wax fiican mooyee, marka laga reebo kuwa dulmiga fala oo ka mid ah, waxaadna dhahdaan waxaan rumeynay wixii nalagu soo dajiyey iyo wixii laydinku soo dajiyey Ilaahanno iyo ilaahiinna waa mid, annaguna isagaan u hoggaansannay.

* وَلَا تُجَٰدِلُوٓاْ أَهۡلَ ٱلۡكِتَٰبِ إِلَّا بِٱلَّتِي هِيَ أَحۡسَنُ إِلَّا ٱلَّذِينَ ظَلَمُواْ مِنۡهُمۡۖ وَقُولُوٓاْ ءَامَنَّا بِٱلَّذِيٓ أُنزِلَ إِلَيۡنَا وَأُنزِلَ إِلَيۡكُمۡ وَإِلَٰهُنَا وَإِلَٰهُكُمۡ وَٰحِدٞ وَنَحۡنُ لَهُۥ مُسۡلِمُونَ ٤٦

47. Saasaanu kuugu soo dajinney kitaabka, kuwa la siiyey kitaabkana way rumeeyaan, kuwaasna waxaa ka mid ah kuwo rumeyn (reer Makaad), mana diido aayaadkannaga gaal mooyee.

وَكَذَٰلِكَ أَنزَلۡنَآ إِلَيۡكَ ٱلۡكِتَٰبَۚ فَٱلَّذِينَ ءَاتَيۡنَٰهُمُ ٱلۡكِتَٰبَ يُؤۡمِنُونَ بِهِۦۖ وَمِنۡ هَٰٓؤُلَآءِ مَن يُؤۡمِنُ بِهِۦۚ وَمَا يَجۡحَدُ بِـَٔايَٰتِنَآ إِلَّا ٱلۡكَٰفِرُونَ ٤٧

48. Ma tihid mid wax akhriya quraanka ka hor kumana aadan dhigi jirin midigtaada markaas ay shakiyaan kuwa baadilka (xumaanta) ku socda.

وَمَا كُنتَ تَتۡلُواْ مِن قَبۡلِهِۦ مِن كِتَٰبٖ وَلَا تَخُطُّهُۥ بِيَمِينِكَۖ إِذٗا لَّٱرۡتَابَ ٱلۡمُبۡطِلُونَ ٤٨

49. Waase aayaad cad cad kuna sugan laabta kuwa cilmiga la siiyey, wax diidi aayaadkannaga oon daalimiinta ahaynna ma jiro.

بَلۡ هُوَ ءَايَٰتُۢ بَيِّنَٰتٞ فِي صُدُورِ ٱلَّذِينَ أُوتُواْ ٱلۡعِلۡمَۚ وَمَا يَجۡحَدُ بِـَٔايَٰتِنَآ إِلَّا ٱلظَّٰلِمُونَ ٤٩

Cirka iyo dhulka waxaa ku sugan aayado wax lagu qaato, ruuxa mu'minka ahna waxaa laga rabaa inuu akhriyo quraanka salaadana oogo, illeen waxa xun bay reebtaaye, xusidda Alle na ku dadaalo. Saxaabada qaarna waxa ay yiraahdeen: ruuxayna salaadiisu ka reebin xumaanta iyo waxa la naco salaadu uma jirto. (Ibnu abii Xaatim iyo kuwo kale). Tan kale waa in si fiican

dadka xaqa loogu yeedho oon muran lahayn, hasa yeeshee ciddii madax adkaata waa in loola maro sida ku habboon, illeen Ilaaheen waa mid kaliya isagaanna u hogaansannahaye, quraankana isagaa soo dajiyey cid aan gaal ahaynna ma diiddo. Nabiguna wax ma akhrin jirin mana qori jirin quraanka ka hor, illeen way shakin lahaayeen xumaanlowguye. **[Al-Cankabuut: 44-49].**

وَقَالُواْ لَوۡلَآ أُنزِلَ عَلَيۡهِ ءَايَٰتٞ مِّن رَّبِّهِۦۖ قُلۡ إِنَّمَا ٱلۡأٓيَٰتُ عِندَ ٱللَّهِ وَإِنَّمَآ أَنَا۠ نَذِيرٞ مُّبِينٌ ٥٠

50. Waxay dhaheen gaaladii (Makaad) maxaa loogu dajin waayey korkiisa aayado xagga Alle ka yimid, waxaad dhahdaa aayaadku waxaa uun ay ka yimaadaan Alle agtiisa aniguse waxaan uun ahay u dige muuqda.

أَوَلَمۡ يَكۡفِهِمۡ أَنَّآ أَنزَلۡنَا عَلَيۡكَ ٱلۡكِتَٰبَ يُتۡلَىٰ عَلَيۡهِمۡۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَرَحۡمَةٗ وَذِكۡرَىٰ لِقَوۡمٖ يُؤۡمِنُونَ ٥١

51. Miyuusanse ku filleyn inaan kugu soo dajinnay kitaabka (quraanka) oo lagu akhriyo korkaaga, arrintaasna naxariis iyo waano yaa ugu sugan qoomkii rumeyn (xaqa).

قُلۡ كَفَىٰ بِٱللَّهِ بَيۡنِي وَبَيۡنَكُمۡ شَهِيدٗاۖ يَعۡلَمُ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۗ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ بِٱلۡبَٰطِلِ وَكَفَرُواْ بِٱللَّهِ أُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلۡخَٰسِرُونَ ٥٢

52. Waxaad dhahdaa waxaa ku filan dhexdeenna Alle markhaati ahaan wuxuuna og yahay waxa ku sugan samooyinka iyo dhulka, kuwa rumeeyey baadil kana gaaloobay Alle kuwaasi iyaga uun baa khasaaray.

وَيَسۡتَعۡجِلُونَكَ بِٱلۡعَذَابِ وَلَوۡلَآ أَجَلٞ مُّسَمّٗى لَّجَآءَهُمُ ٱلۡعَذَابُۚ وَلَيَأۡتِيَنَّهُم بَغۡتَةٗ وَهُمۡ لَا يَشۡعُرُونَ ٥٣

53. Waxay kaa dadajisan cadaab, haddayna jirin muddo magacaaban waxaa u imaan lahaa cadaabka, wuxuuna ugu imaan lahaa kado iyagoon ogayn.

يَسۡتَعۡجِلُونَكَ بِٱلۡعَذَابِ وَإِنَّ جَهَنَّمَ لَمُحِيطَةُۢ بِٱلۡكَٰفِرِينَ ٥٤

54. Waxay kaa dadajisan cadaab, naarta jahannamana waxay koobi gaalada.

55. Maalinta (qiyaamada) waxaa dabooli gaalada cadaab korkooda iyo lugahooda hoostoodaba, wuxuuna ku dhihi Alle dhadhamiya waxaad camalfali jirteen.

يَوْمَ يَغْشَىٰهُمُ ٱلْعَذَابُ مِن فَوْقِهِمْ وَمِن تَحْتِ أَرْجُلِهِمْ وَيَقُولُ ذُوقُوا۟ مَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٥٥﴾

Gaaladii ree Makaad aad bay Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) u dhibeen uguna madax adkaadeen, waxayna warsadeen mucjisooyin gaar ah oo say rabaan ah, waxaase ku filan ruuxii xaqa raba quraanka naxariista iyo hanuunka ah, marag iyo gargaarana Alle ayaa ku filan, kuwa khasaarayse waa kuwa rumeeyey xumaan xaqana beeniyey, cadaabna wax la dadajisto ma aha, illeen wax walba mudduu leeyahaye, waxaase imaan maalin cadaabku dhan walba gaalada ka koobi si xunna ay u dulloobi. Rasuulkuna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): Nabi kasta waxaa la siiyey wax isagoo kale dadku ku rumeeyeen waxaase lay siiyey waxyi Alle ii waxyooday, waxaana rajayn inaan ahaado midka kuwa raacay ugu badan yihiin. **[Al-Cankabuut: 50-55].**

56. Addoomadayda rumeeyow dhulkaygu waa waasac ee aniga uun i caabuda.

يَٰعِبَادِىَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ إِنَّ أَرْضِى وَٰسِعَةٌ فَإِيَّٰىَ فَٱعْبُدُونِ ﴿٥٦﴾

57. Nafkastaa waxay dhadhamin geerida xaggaygaana laydiin soo celin markaas.

كُلُّ نَفْسٍ ذَآئِقَةُ ٱلْمَوْتِ ثُمَّ إِلَيْنَا تُرْجَعُونَ ﴿٥٧﴾

58. Kuwa (xaqa) rumeeyey camal fiicanna falay waxaannu ka dajin jannada qolol ay dureeri dhexdeeda wabiyaal ayna ku waari dhexdeeda, waxaana ugu wanaagsan ujuurada kuwa shaqeeyey (jannada).

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ لَنُبَوِّئَنَّهُم مِّنَ ٱلْجَنَّةِ غُرَفًا تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَا ۚ نِعْمَ أَجْرُ ٱلْعَٰمِلِينَ ﴿٥٨﴾

59. Ee ah kuwa samray Rabbigoodna tala saarta.

ٱلَّذِينَ صَبَرُوا۟ وَعَلَىٰ رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ ﴿٥٩﴾

60. Badanaa dhul socod aan xambaaran karin rizqigeeda ee Alle arzuqo iyada iyo idinkaba. Alle na waa maqle oge ah.

وَكَأَيِّن مِّن دَآبَّةٍ لَّا تَحْمِلُ رِزْقَهَا ٱللَّهُ يَرْزُقُهَا وَإِيَّاكُمْ ۖ وَهُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْعَلِيمُ ﴿٦٠﴾

61. Haddaad waydiiso gaalada yaa abuuray samooyinka iyo dhulka oo sakhiray qorraxda iyo dayaxa, waxay odhan Ilaahay, ee xagee loo iili gaalada.

وَلَئِن سَأَلْتَهُم مَّنْ خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ وَسَخَّرَ ٱلشَّمْسَ وَٱلْقَمَرَ لَيَقُولُنَّ ٱللَّهُ ۖ فَأَنَّىٰ يُؤْفَكُونَ ﴿٦١﴾

62. Alle ayaa u waasiciya rizqiga ruuxuu doono oo addoomihiisa ah, kuna cidhiidhya (kuu doono), Alle na wax walba waa og yahay.

ٱللَّهُ يَبْسُطُ ٱلرِّزْقَ لِمَن يَشَآءُ مِنْ عِبَادِهِۦ وَيَقْدِرُ لَهُۥٓ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمٌ ﴿٦٢﴾

63. Haddaad waydiiso gaalada yaa ka soo dajiya samada biyo oo ku nooleeya dhulka intuu dhintay (abaaroobay) kadib waxay odhan Ilaahay, waxaad dhahdaa mahad Alle ayaa iska leh, badankooduse wax ma kasayaan.

وَلَئِن سَأَلْتَهُم مَّن نَّزَّلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَأَحْيَا بِهِ ٱلْأَرْضَ مِنۢ بَعْدِ مَوْتِهَا لَيَقُولُنَّ ٱللَّهُ ۚ قُلِ ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ ۚ بَلْ أَكْثَرُهُمْ لَا يَعْقِلُونَ ﴿٦٣﴾

Alleheen wuxuu u sheegay addoommadiisa rumeeyey in dhulkiisu waasac yahay meel kastana ay ku caabudaan illeen naf walba way dhimane xagga Alle ayaana loo celine, kuwa xaqa rumeeyey oo camal fiican falay waxaa la dajin janno ay ku waaraan illeen dar Alle ayay u samreen wayna tala saarteen. Alle ayaana wax kasta quudiya oo maqla oo og. Rasuulkuna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): dhulku waa dhul Alle, addoomuhuna waa addoomo Alle ee meeshaad khayr ka heshaba ku nagow. Imaam Axmed. Waxayna ku tusin in dhulka muslimiintu dhul kaliya yahay xaqna kuwada leeyihiin gaaladiina haddii la warsado yaa abuuray cirka, dhulka, qorraxda, dayaxa oo cirka biya ka keena waxna arzuqa waxay qiri inuu Alle yahay, gardarrayse u dhumeen dhabtuna waa in cid kasta rumeysan tahay awoodda Alle ee waxay u beenin xaqana uga leexan dan gaar ahaaneed iyo yaan lagu xisaabin. **[Al-Cankabuut: 56-63].**

64. Mana aha noloshan adduunyo ciyaar iyo dheeldheel mooyee, daarta aakhiraana meel nololeed ah hadday wax ogyihiin dadku.

وَمَا هَٰذِهِ ٱلْحَيَوٰةُ ٱلدُّنْيَآ إِلَّا لَهْوٌ وَلَعِبٌ ۚ وَإِنَّ ٱلدَّارَ ٱلْءَاخِرَةَ لَهِىَ ٱلْحَيَوَانُ ۚ لَوْ كَانُوا۟ يَعْلَمُونَ ﴿٦٤﴾

65. Markay koraan doonta waxay baryaan Alle iyagoo u kali yeeli cibaadada, markuu u koriyo (oo geeyo) barrigana (dhulkana)

فَإِذَا رَكِبُوا۟ فِى ٱلْفُلْكِ دَعَوُا۟ ٱللَّهَ مُخْلِصِينَ لَهُ ٱلدِّينَ فَلَمَّا نَجَّىٰهُمْ إِلَى ٱلْبَرِّ إِذَا هُمْ يُشْرِكُونَ ﴿٦٥﴾

markaasay u shariig yeelaan (wax la caabudaan).

66. Si ay uga gaaloobaan waxaan siinnay uguna raaxaystaan, wayse ogaan doonaan (cidhibteeda).

67. Miyeyna arkeyn gaaladii (Qureesheed) inaan yeelnay (dajinnay) xaram aamin ah oo la dafayo dadka dhinacyadooda ah, ma baadil bay rumeyn oo nicmada Alle ayay ka gaaloobi.

68. Cidna kama dulmi badna ruux ku been abuurtay Alle korkiisa ama beeniyey xaqa markuu u yimid, miyeyna ahayn jahannamo hoyga gaalada.

69. Kuwa ku jahaaday dartanno waxaannu ku hanuunin jidkannaga, Alle na wuxuu la jiraa kuwa wanaagga fala.

لِيَكۡفُرُواْ بِمَآ ءَاتَيۡنَٰهُمۡ وَلِيَتَمَتَّعُواْۚ فَسَوۡفَ يَعۡلَمُونَ ٦٦

أَوَلَمۡ يَرَوۡاْ أَنَّا جَعَلۡنَا حَرَمًا ءَامِنٗا وَيُتَخَطَّفُ ٱلنَّاسُ مِنۡ حَوۡلِهِمۡۚ أَفَبِٱلۡبَٰطِلِ يُؤۡمِنُونَ وَبِنِعۡمَةِ ٱللَّهِ يَكۡفُرُونَ ٦٧

وَمَنۡ أَظۡلَمُ مِمَّنِ ٱفۡتَرَىٰ عَلَى ٱللَّهِ كَذِبًا أَوۡ كَذَّبَ بِٱلۡحَقِّ لَمَّا جَآءَهُۥٓۚ أَلَيۡسَ فِي جَهَنَّمَ مَثۡوٗى لِّلۡكَٰفِرِينَ ٦٨

وَٱلَّذِينَ جَٰهَدُواْ فِينَا لَنَهۡدِيَنَّهُمۡ سُبُلَنَاۚ وَإِنَّ ٱللَّهَ لَمَعَ ٱلۡمُحۡسِنِينَ ٦٩

Nolosha adduunyo waa uun ciyaar oo kale raaxadeeduna waa uun muddo yar aakharaase nolal dhab ahi jirtaa waase inaan laysku halmaamin adduunka aakhirana laga jeedsannin, shaqada xalaasha ahse waa waajib leyska abaalmarin. Waxaa ka mid ah caadada dadka in markay dhib la kulmaan sida markay badda ku safraan ama meelaha kalaba ay Alle isudulleeyaan markuu dhibkii ka saarana ay kuwo badan gaaloobaan kana jeedsadaan. Waxaa kale oo Alle ku mannaystay kuwii reer Makaad inuu dajiyey xaram aamin ah oo dadka gaararkooda ahna la waxyeelleeyo, mase habboona iney xumaan rumeeyaan xaqana ka gaaloobaan. Cid ka dulmi badanna ma jirto ruux ku been abuurtay Alle ama xaqa beeniyey jahannamana waa xerada gaalada. Kuwase u jahaada dar Alle wuu hanuunin Alle una gargaari. Taasina waxay ku tusin ahmiyadda jahaadka iyo sharaftiisa. **[Al-Cankabuut: 64-69].**

Suurat Ar-Ruum

سُورَةُ الرُّومِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxay ku tusin mucjisada quraanka (sidii soo hormartay).

الٓمٓ ﴿١﴾

2. Waxaa lagaga adkaaday Ruum.

غُلِبَتِ ٱلرُّومُ ﴿٢﴾

3. Dhulkii dhawaa, intii laga adkaaday ka dibna way adkaan.

فِيٓ أَدۡنَى ٱلۡأَرۡضِ وَهُم مِّنۢ بَعۡدِ غَلَبِهِمۡ سَيَغۡلِبُونَ ﴿٣﴾

4. Dhawr sano dhexdeed, amarkana Alle ayaa iska leh horey iyo dibba, maalintaasayna ku farxi mu'miniintu.

فِي بِضۡعِ سِنِينَۗ لِلَّهِ ٱلۡأَمۡرُ مِن قَبۡلُ وَمِنۢ بَعۡدُۚ وَيَوۡمَئِذٖ يَفۡرَحُ ٱلۡمُؤۡمِنُونَ ﴿٤﴾

5. Gargaarka Alle, wuxuuna u gargaari cidduu doono, waana adkaade naxariista ah.

بِنَصۡرِ ٱللَّهِۚ يَنصُرُ مَن يَشَآءُۖ وَهُوَ ٱلۡعَزِيزُ ٱلرَّحِيمُ ﴿٥﴾

6. Waa yabooha Alle, mana baajiyo Alle yaboohiisa, laakiin dadka badankiisu ma oga.

وَعۡدَ ٱللَّهِۖ لَا يُخۡلِفُ ٱللَّهُ وَعۡدَهُۥ وَلَٰكِنَّ أَكۡثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يَعۡلَمُونَ ﴿٦﴾

7. Waxay yaqaannaan dadku muuqaalka nolosha adduunyo aakhirose way halmaansan yihiin (ka jaahil yihiin).

يَعۡلَمُونَ ظَٰهِرٗا مِّنَ ٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَا وَهُمۡ عَنِ ٱلۡأٓخِرَةِ هُمۡ غَٰفِلُونَ ﴿٧﴾

8. Miyeyna ka fikirin naftooda inuusan Alle samaawaadka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya u abuurin waxaan xaq iyo muddo

أَوَلَمۡ يَتَفَكَّرُواْ فِيٓ أَنفُسِهِمۡۗ مَّا خَلَقَ ٱللَّهُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضَ وَمَا بَيۡنَهُمَآ إِلَّا بِٱلۡحَقِّ وَأَجَلٖ مُّسَمًّىۗ وَإِنَّ كَثِيرٗا

magacaaban ahayn, wax badan oo dadka ka mid ahna waxay ka gaaloobi la kulanka Rabbigood.

مِّنَ ٱلنَّاسِ بِلِقَآيِٕ رَبِّهِمْ لَكَٰفِرُونَ ﴿٨﴾

Suuraddan waxay soo dagtay markay is laayeen reer Ruum oo ehelu kitaab ahaa iyo reer Furus oo majuusi (dabcaabuda) ahaa, markaasna laga adkaaday reer Ruum, kadibna gaaladii farxeen oo dheheen waxaannu ka adkaan muslimiinta, laakiin sida Alle sheegay Ruumbaa adkaatay muddo yar ka dib, si mu'miniintu ugu faraxdo gargaarka Alle iyo cidduu wax u yabooho uusan ka baajineynin, gaalase waxay awooddoodii isugu geeyeen nolosha adduun aakhirana way ka jeed sadeen, mana fikirin inaan Alle ciyaar u abuurin khalqigiisa. Calaa binu Subayr wuxuu ka wariyey aabihiis inuu yidhi: waxaan arkay Faarisoo Ruum ka adkaatay iyo Ruumoo Faaris ka adkaatay, ka dibna waxaan arkay muslimiintoo ka adkaatay Faaris iyo Ruumba. Dhammaanna waxay ahaayeen dhawr iyo toban sano dhexdeed. Ibnu Kathiir. **[Ar-Ruum: 1-8].**

أَوَلَمْ يَسِيرُواْ فِى ٱلْأَرْضِ فَيَنظُرُواْ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ ۚ كَانُوٓاْ أَشَدَّ مِنْهُمْ قُوَّةً وَأَثَارُواْ ٱلْأَرْضَ وَعَمَرُوهَآ أَكْثَرَ مِمَّا عَمَرُوهَا وَجَآءَتْهُمْ رُسُلُهُم بِٱلْبَيِّنَٰتِ ۖ فَمَا كَانَ ٱللَّهُ لِيَظْلِمَهُمْ وَلَٰكِن كَانُوٓاْ أَنفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ ﴿٩﴾

9. Miyeyna ku soconnin dhulka oy eegaan siday ahaatay cidhibtii kuwii ka horreeyey (gaaladii Makaad) waxay ahaayeen kuwo ka daran iyaga kana xoog badan, dhulkana way beerteen wayna dhiseen dhulka intay dhiseen wax ka badan. Waxayna ula timid rasuulladoodii xujooyin, Alle na ma aha mid wax dulmiya, laakiin iyagaa naftooda dulmiyey.

ثُمَّ كَانَ عَٰقِبَةَ ٱلَّذِينَ أَسَٰٓـُٔواْ ٱلسُّوٓأَىٰٓ أَن كَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ وَكَانُواْ بِهَا يَسْتَهْزِءُونَ ﴿١٠﴾

10. Markaasay noqotay cidhibtii kuwii xumaanta falay, xumaan iyo (jahannamo) beenintay aayadaha Alle beeniyeen darteed, oo ayna ahaayeen kuwo aayadaha ku jees jeesa.

ٱللَّهُ يَبْدَؤُا۟ ٱلْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُۥ ثُمَّ إِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿١١﴾

11. Alle ayaa billaabay (abuurka) khalqiga isagaana soo celin, xaggiisaana laydiin celin.

12. Maalintay kici saacaddu (qiyaamadu) way aamusi dambiilayaashu (ooy quusan).

وَيَوْمَ تَقُومُ ٱلسَّاعَةُ يُبْلِسُ ٱلْمُجْرِمُونَ ﴿١٢﴾

13. Ugumana sugnaannin kuway Alle la wadajiyeen (cibaadada) shafeeco waxayna noqdeen kuwo diida shurakadoodii.

وَلَمْ يَكُن لَّهُم مِّن شُرَكَآئِهِمْ شُفَعَٰٓؤُا۟ وَكَانُوا۟ بِشُرَكَآئِهِمْ كَٰفِرِينَ ﴿١٣﴾

14. Maalintay kici saacaddu waa maalin ay kala tagi dadku.

وَيَوْمَ تَقُومُ ٱلسَّاعَةُ يَوْمَئِذٍ يَتَفَرَّقُونَ ﴿١٤﴾

15. Kuwa rumeeyey (xaqa) oo camal fiican falay beer janno yaa lagu faraxgaliyaa.

فَأَمَّا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ فَهُمْ فِى رَوْضَةٍ يُحْبَرُونَ ﴿١٥﴾

16. Kuwa gaaloobayse oo beeniyey aayaadkannaga iyo la kulanka aakhiro kuwaas waxaa lagu kulmin cadaabka.

وَأَمَّا ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَكَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا وَلِقَآءِ ٱلْءَاخِرَةِ فَأُو۟لَٰٓئِكَ فِى ٱلْعَذَابِ مُحْضَرُونَ ﴿١٦﴾

Aayadahan wuxuu Alle ku hanuunin in dadku dhulka ku socdaan si ay u arkaan qudrada Alle iyo awooddiisa iyo inay arkaan raadkii ummadihii hore ee la abaalmariyey markay xaqii beeniyeen iyo in ciddii xumaan fasha cidhibteedu noqon in xumaan lagu abaalmariyo. Tan kale waxay dadku noqon maalintaas qiyaame laba kooxood, xaq raacayaal janno gali, iyo xaq diidayaal naar u dheelman.

Qataadana wuxuu yidhi: wallee waa kala tag aan kulan ka dambayn. **[Ar-Ruum: 9-16].**

17. Alle ayaa nasahan (ceeb ka fog) markaad galabaysanaysaan iyo markaad waabariisanaysaan.

فَسُبْحَٰنَ ٱللَّهِ حِينَ تُمْسُونَ وَحِينَ تُصْبِحُونَ ﴿١٧﴾

18. Mahadna isagaa ku leh samooyinka iyo dhulka dhexdooda iyo habeenkii iyo duhurkiiba.

وَلَهُ ٱلْحَمْدُ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَعَشِيًّا وَحِينَ تُظْهِرُونَ ﴿١٨﴾

يُخۡرِجُ ٱلۡحَيَّ مِنَ ٱلۡمَيِّتِ وَيُخۡرِجُ ٱلۡمَيِّتَ مِنَ ٱلۡحَيِّ وَيُحۡيِ ٱلۡأَرۡضَ بَعۡدَ مَوۡتِهَاۚ وَكَذَٰلِكَ تُخۡرَجُونَ ﴿١٩﴾

19. Kana soo bixiya wax nool wax dhintay wax dhintayna wax nool, nooleeyana dhulka intuu dhintay ka dib, saasaana laydiin soo bixin.

وَمِنۡ ءَايَٰتِهِۦٓ أَنۡ خَلَقَكُم مِّن تُرَابٍ ثُمَّ إِذَآ أَنتُم بَشَرٞ تَنتَشِرُونَ ﴿٢٠﴾

20. Waxaana ka mid ah calaamooyinkiisa inuu idinka abuuray carro markaasaad noqoteen dad dhaqdhaqaaqi (faafi).

وَمِنۡ ءَايَٰتِهِۦٓ أَنۡ خَلَقَ لَكُم مِّنۡ أَنفُسِكُمۡ أَزۡوَٰجٗا لِّتَسۡكُنُوٓاْ إِلَيۡهَا وَجَعَلَ بَيۡنَكُم مَّوَدَّةٗ وَرَحۡمَةًۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَأٓيَٰتٖ لِّقَوۡمٖ يَتَفَكَّرُونَ ﴿٢١﴾

21. Waxaa ka mid ah calaamooyinkiisa inuu idiinka abuuray naftiinna haween si aad isugu xasishaan, yeelayna dhexdiinna isjacayl iyo naxariis, taasina waxaa ugu sugan calaamad qoomkii fikiri.

Aayadahan waxay inagu hanuunin inaan Alle u tasbiixsanno xumaantana ka nasahno wakhti walba, illeen isagaa awood leh oo wax walba abuuraye dadkana soo bixin doonee, waxaana ka mid ah aayaadka jiritaanka Alle iyo awooddiisa ku tusin inuu dadka carro ka abuuray, rag iyo haweenna ka dhigay si ay isu guursadaan oo isula nagaadaan iyaga oo naxariis iyo jacayl dhexyaallo.

Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Alle wuxuu ka abuuray Aadam dhulka oo dhan wax ka mid ah, markaasuu noqday bini Aadamkii sida dhulka, waxaa ka mid ah mid cad, mid cas, mid madow iyo mid u dhaxeeya, iyo mid xun iyo mid fiican iyo mid fudud (xagga dabeecada), iyo mid adag iyo mid u dhaxeeya. Waxaa wariyey Axmed, Abuudaawuud, Tirmidi. **[Ar-Ruum: 17-21].**

وَمِنۡ ءَايَٰتِهِۦ خَلۡقُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ وَٱخۡتِلَٰفُ أَلۡسِنَتِكُمۡ وَأَلۡوَٰنِكُمۡۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَأٓيَٰتٖ لِّلۡعَٰلِمِينَ ﴿٢٢﴾

22. Waxaa ka mid ah aayaadka ku tusin (qudrada) Alle samooyinka uu abuuray iyo dhulka iyo kala duwanaanta afkiinna (luuqada) iyo midabkiinnaba, taasina calaamad yaa ugu sugan kuwa cilmiga leh.

23. Waxaa ka mid ah aayaadka ku tusin (qudrada) Alle hurdadiinna habeenkii iyo maalintii iyo dooniddiina fadliga Alle, taasna calaamad yaa ugu sugan kuwa wax maqli.

وَمِنْ ءَايَٰتِهِۦ مَنَامُكُم بِٱلَّيْلِ وَٱلنَّهَارِ وَٱبْتِغَآؤُكُم مِّن فَضْلِهِۦٓ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَٰتٍ لِّقَوْمٍ يَسْمَعُونَ ﴿٢٣﴾

24. Waxaa ka mid ah aayaadka ku tusin (qudrada) Alle hillaaca uu idin tusiyo, cabsi iyo doonid darteed, iyo samada uu idiinka soo dajiyo biyo, kuna nooleeyo dhulka intuu dhintay ka dib, taasina calaamado yaa ugu sugan kuwa wax kasi.

وَمِنْ ءَايَٰتِهِۦ يُرِيكُمُ ٱلْبَرْقَ خَوْفًا وَطَمَعًا وَيُنَزِّلُ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَيُحْىِۦ بِهِ ٱلْأَرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَآ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَٰتٍ لِّقَوْمٍ يَعْقِلُونَ ﴿٢٤﴾

25. Waxaa ka mid ah aayaadka ku tusin (qudrada) Alle inay samada iyo dhulku ku taagan yihiin amarka Alle, markuu dhulka idiinka yeedhana (soo bixinta) aa durba soo baxdaan.

وَمِنْ ءَايَٰتِهِۦٓ أَن تَقُومَ ٱلسَّمَآءُ وَٱلْأَرْضُ بِأَمْرِهِۦ ۚ ثُمَّ إِذَا دَعَاكُمْ دَعْوَةً مِّنَ ٱلْأَرْضِ إِذَآ أَنتُمْ تَخْرُجُونَ ﴿٢٥﴾

Wali waxay ka warrami aayaadku awoodda Alle iyo siduu u abuuray cirka iyo dhulka iyo siduu u kala duway hadalka iyo midabka binii Aadamka, iyo siduu ugu sahlay hurdada si loogu nasto, ka dibna khayrka Alle loo dalbo waxyaalahaasna calaamad yaa ugu sugan ciddii wax garan ama maqli, sidaas oo kale waa kan Alle dadka tusiyo hillaaca, cirkana roob ka keena dhulkana ku nooleeya, amarkiisuuna cirka iyo dhulka ku taagan yihiin, dadkana ka soo bixin doona dhulka qiyaame darteed. **[Ar-Ruum: 22-25].**

26. Alle ayaa iska leh waxa samooyinka iyo dhulkaba ku sugan, isagayna u khushuucaan (u hoggaansamaan).

وَلَهُۥ مَن فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۖ كُلٌّ لَّهُۥ قَٰنِتُونَ ﴿٢٦﴾

27. Alle waa kan billaabay abuurka khalqiga, hadana soo celin, isagaana u fudud Alle, Ilaahay ayaana sifo sare ku muta samooyinka iyo dhulka, waana adkaade falsan.

وَهُوَ ٱلَّذِى يَبْدَؤُا۟ ٱلْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُۥ وَهُوَ أَهْوَنُ عَلَيْهِ ۚ وَلَهُ ٱلْمَثَلُ ٱلْأَعْلَىٰ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ وَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿٢٧﴾

ضَرَبَ لَكُم مَّثَلًا مِّنْ أَنفُسِكُمْ ۖ هَل لَّكُم مِّن مَّا مَلَكَتْ أَيْمَٰنُكُم مِّن شُرَكَآءَ فِى مَا رَزَقْنَٰكُمْ فَأَنتُمْ فِيهِ سَوَآءٌ تَخَافُونَهُمْ كَخِيفَتِكُمْ أَنفُسَكُمْ ۚ كَذَٰلِكَ نُفَصِّلُ ٱلْءَايَٰتِ لِقَوْمٍ يَعْقِلُونَ ﴿٢٨﴾

28. Alle wuxuu idiin yeeley tusaale naftiinna ah, waxaad hanataan miyey idinla wadaagaan wax laydinku arzuqay, ood si isku mid ah u maamulaysaan, ugana cabsanaysaan sidaad isaga cabsataan, saasuuna u caddayn aayaadka ciddii wax kasi.

بَلِ ٱتَّبَعَ ٱلَّذِينَ ظَلَمُوٓا۟ أَهْوَآءَهُم بِغَيْرِ عِلْمٍ ۖ فَمَن يَهْدِى مَنْ أَضَلَّ ٱللَّهُ ۖ وَمَا لَهُم مِّن نَّٰصِرِينَ ﴿٢٩﴾

29. Hase yeeshee waxay raaceen kuwii dulmilowga ahaa hawadooda iyagoon wax ogayn, yaa hanuunin kara ruux Alle dhumid u qaddaray, wax u gargaarana lahayn.

Wax walba awoodda Alle yey ku jirtaa, ama cir ha ku noolaado ama dhule, wax walbana Alle ayaa abuuray u soona celin si fudud, ammaan iyo sharaf sarana Alle ayaa mudan, awood iyo xigmadna isagaa leh, wax maamulkiisa la wadaagana ma jiro, ruuxiise aqoon la'aan hawadiisa iska raaca oo dulmi fala yaa tusin oo u gargaari Alle ka sokow. Abuu Hureera waxaa laga wariyey in Rasuulku yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): Alle wuxuu yidhi: waxaa i beeniyey ina Aadam umana habboona, wuuna i caayey umana habboona. **[Ar-Ruum: 26-29].**

فَأَقِمْ وَجْهَكَ لِلدِّينِ حَنِيفًا ۚ فِطْرَتَ ٱللَّهِ ٱلَّتِى فَطَرَ ٱلنَّاسَ عَلَيْهَا ۚ لَا تَبْدِيلَ لِخَلْقِ ٱللَّهِ ۚ ذَٰلِكَ ٱلدِّينُ ٱلْقَيِّمُ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٣٠﴾

30. Ee wajigaaga u jeedi diinta adoo toosan, (isagoo ah diinkaasu) abuuridda Alle ee dadka uu ku abuuray (towxiidka), wax baddali kara diinka Alle na ma jiro, saasina waa diinta toosan laakiin dadka badidiis ma oga.

* مُنِيبِينَ إِلَيْهِ وَٱتَّقُوهُ وَأَقِيمُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ وَلَا تَكُونُوا۟ مِنَ ٱلْمُشْرِكِينَ ﴿٣١﴾

31. Idinkoo Alle u noqon, kana yaaba, salaaddana ooga, gaaladana ha ka mid noqonnina.

مِنَ ٱلَّذِينَ فَرَّقُوا۟ دِينَهُمْ وَكَانُوا۟ شِيَعًا ۖ كُلُّ حِزْبٍۭ بِمَا لَدَيْهِمْ فَرِحُونَ ﴿٣٢﴾

32. Ee diintooda ku kala tagay noqdayna kooxo, xisbi walba uu ku farxi waxa agtiisa ah.

33. Hadduu dadka taabto dhib waxay baryaan Rabbigood iyagoo u noqon, markuuse dhadhansiiyo naxariis qayb iyaga ka mid ah waxay wax la wadaajiyaan Rabbigood.

وَإِذَا مَسَّ ٱلنَّاسَ ضُرٌّ دَعَوْا۟ رَبَّهُم مُّنِيبِينَ إِلَيْهِ ثُمَّ إِذَآ أَذَاقَهُم مِّنْهُ رَحْمَةً إِذَا فَرِيقٌ مِّنْهُم بِرَبِّهِمْ يُشْرِكُونَ ﴿٣٣﴾

34. Si ay uga gaaloobaan waxaan siinney, iska raaxaysta, waadna ogaandoontaan cidhibta raaxadaasi.

لِيَكْفُرُوا۟ بِمَآ ءَاتَيْنَٰهُمْ ۚ فَتَمَتَّعُوا۟ فَسَوْفَ تَعْلَمُونَ ﴿٣٤﴾

35. Mise waxaan ku soo dejinney xujo, oo ku hadli waxay Alle la wadaajin.

أَمْ أَنزَلْنَا عَلَيْهِمْ سُلْطَٰنًا فَهُوَ يَتَكَلَّمُ بِمَا كَانُوا۟ بِهِۦ يُشْرِكُونَ ﴿٣٥﴾

Diinta islaamku waa diin xaq ah, waana diin waafaqsan abuuridda dadka iyo waxa wanaag ah ee ay dooni wax ka hor imaan karaana ama baddali karaana ma jiro waxayna fari Alle adeecid, sida salaadda, zakada iyo isku duubni iyo midnimo, iyo in diintoo lagu kala tago (oo diimo aan islaamka ahayn la sheegto) ay gaalnimo tahay, had iyo jeerna waa in Alle la xusuusnaado, dhib iyo barwaaqaba si aan nicmadiisa looga gaaloobin xujo la'aan, ruuxii gaalnimo ku raaxaystana wuxuu la kulmi ciqaab xun. **[Ar-Ruum: 30-35].**

36. Haddaan dhadhansiinno dadka naxariis way ku farxi «kibraan» hadduu dhib ku dhacana waxay hor marsadeen darteed way quustaan.

وَإِذَآ أَذَقْنَا ٱلنَّاسَ رَحْمَةً فَرِحُوا۟ بِهَا ۖ وَإِن تُصِبْهُمْ سَيِّئَةٌۢ بِمَا قَدَّمَتْ أَيْدِيهِمْ إِذَا هُمْ يَقْنَطُونَ ﴿٣٦﴾

37. Miyeyna arkayn in Alle u waasiciyo rizqiga cidduu doono, kuna cidhiidhyo (cidduu doono) arrintaasna calaamooyin baa ugu sugan kuwa rumeyn (xaqa).

أَوَلَمْ يَرَوْا۟ أَنَّ ٱللَّهَ يَبْسُطُ ٱلرِّزْقَ لِمَن يَشَآءُ وَيَقْدِرُ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَٰتٍ لِّقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴿٣٧﴾

38. Ee qaraabada sii xaqeeda iyo miskiinka iyo musaafurka, saasaa u khayr roon kuwa dooni wajiga Alle, (u dhawaanshahiisa) kuwaasina waa kuwa liibaanay.

فَـَٔاتِ ذَا ٱلْقُرْبَىٰ حَقَّهُۥ وَٱلْمِسْكِينَ وَٱبْنَ ٱلسَّبِيلِ ۚ ذَٰلِكَ خَيْرٌ لِّلَّذِينَ يُرِيدُونَ وَجْهَ ٱللَّهِ ۖ وَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْمُفْلِحُونَ ﴿٣٨﴾

39. Waxaad bixisaan oo ribo ah si aad uga badsataan xoolaha dadka ma badnaado Alle agtiisa, wixiise aad bixisaan oo zako (xalaal ah) idinkoo ku dooni wajiga Alle kuwaas waa loo laablaabi.

وَمَآ ءَاتَيْتُم مِّن رِّبًا لِّيَرْبُوَا۟ فِىٓ أَمْوَٰلِ ٱلنَّاسِ فَلَا يَرْبُوا۟ عِندَ ٱللَّهِ ۖ وَمَآ ءَاتَيْتُم مِّن زَكَوٰةٍ تُرِيدُونَ وَجْهَ ٱللَّهِ فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْمُضْعِفُونَ ﴿٣٩﴾

Sida marar badan soo martay waa in Alle had iyo jeer lagu xidhnaado lana xuso dhib iyo barwaaqaba, aan lana kibrin lana quusan illeen saasi waa xigmad Alle, qaraabada, masaakiinta, musaafuriinta iyo dadka oomoon oo dhanna loogu samo falo Alle dartiis, si loo liibaano, ribada, damaca xoolaha dadka iyo xoola jacaylka daranna layska jiro, lana sadaqaysto xoolo xalaal ah si Alle agtiisa loogu liibaano. **[Ar-Ruum: 36-39].**

40. Alle waa kan idin abuuray haddana idin arzaaqay haddana idin dili, haddana idin soo noolayn, ma jiraa shurakadiinna mid fali sidaas wax ka mid ah? Alle ayaa ka nasahanna kana sarreeya waxay la wadaajin.

ٱللَّهُ ٱلَّذِى خَلَقَكُمْ ثُمَّ رَزَقَكُمْ ثُمَّ يُمِيتُكُمْ ثُمَّ يُحْيِيكُمْ ۖ هَلْ مِن شُرَكَآئِكُم مَّن يَفْعَلُ مِن ذَٰلِكُم مِّن شَىْءٍ ۚ سُبْحَٰنَهُۥ وَتَعَٰلَىٰ عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿٤٠﴾

41. Xumaan baa ka daahirtay barri iyo badba, waxay kasbatay gacmo dad dartiis, si Alle u dhadhansiiyo waxay camal faleen qaarkiis, inay noqdaan.

ظَهَرَ ٱلْفَسَادُ فِى ٱلْبَرِّ وَٱلْبَحْرِ بِمَا كَسَبَتْ أَيْدِى ٱلنَّاسِ لِيُذِيقَهُم بَعْضَ ٱلَّذِى عَمِلُوا۟ لَعَلَّهُمْ يَرْجِعُونَ ﴿٤١﴾

42. Waxaad dhahdaa ku socda dhulka fiiriyana siday noqotay cidhibtii kuwii hore, wuxuu ahaa badankoodu mushrikiin.

قُلْ سِيرُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ فَٱنظُرُوا۟ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلُ ۚ كَانَ أَكْثَرُهُم مُّشْرِكِينَ ﴿٤٢﴾

43. Ee wajigaaga diinta toosan (islaamka) u jeedi, maalin aan la celin karin ka hor, Alle xaggiisana ka iman, maalintaas dadku way kala tagi.

فَأَقِمْ وَجْهَكَ لِلدِّينِ ٱلْقَيِّمِ مِن قَبْلِ أَن يَأْتِىَ يَوْمٌ لَّا مَرَدَّ لَهُۥ مِنَ ٱللَّهِ ۖ يَوْمَئِذٍ يَصَّدَّعُونَ ﴿٤٣﴾

مَن كَفَرَ فَعَلَيْهِ كُفْرُهُۥ ۖ وَمَنْ عَمِلَ صَٰلِحًا فَلِأَنفُسِهِمْ يَمْهَدُونَ ﴿٤٤﴾

44. Ruuxii gaalooba isagay (dhibi) gaalnimadiisu, ruuxii camal wanaagsan fala naftiisa yuu u goglay.

لِيَجْزِيَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ مِن فَضْلِهِۦٓ ۚ إِنَّهُۥ لَا يُحِبُّ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٤٥﴾

45. Si Alle u abaalmariyo kuwa rumeeyey xaqa oo camal wanaagsan falay fadligiisa, Alle na ma jecla gaalo.

Alle isagaa wax abuuray, oo arzuqa, dili, soona noolayn, xumaanna waa ka fog yahay, dambiga iyo macaasidu waxay sababaan xumaanta dhulka iyo fasaadkiisa, dadkuna way dhadhamin xumaanta gacmahoodu kasbadeen, waase in la fikiro dhulkana la maro, diinta toosan ee islaamka ee xaqa ahna lagu toosnaado, qiyaame iyo xisaab iyo kalatagid ka hor, si xumaanlowgana xumaantiisa looga abaalmariyo, wanaaglowgana samihiisa laga abaalmariyo, Alle na ma jeclo gaal iyo xuma fale, wuxuuse jecel yahay mu'miniinta xaqa raacda, waxaa sugnaaday in dadka, dhulka geedaha iyo xooluhuba ka istareexaan geerida kuwa xun xun. **[Ar-Ruum: 40-45].**

وَمِنْ ءَايَٰتِهِۦٓ أَن يُرْسِلَ ٱلرِّيَاحَ مُبَشِّرَٰتٍ وَلِيُذِيقَكُم مِّن رَّحْمَتِهِۦ وَلِتَجْرِيَ ٱلْفُلْكُ بِأَمْرِهِۦ وَلِتَبْتَغُوا۟ مِن فَضْلِهِۦ وَلَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿٤٦﴾

46. Calaamaadka Alle ku tusin waxaa ka mid ah inuu dabaylaha diro iyagoo ku bishaarayn (roob) iyo in Alle idin dhadhansiiyo naxariistiisa iyo in doontu ku socoto amarkiisa iyo inaad dalabtaan fadligiisa, markaas aad Alle ku mahdisaan.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا مِن قَبْلِكَ رُسُلًا إِلَىٰ قَوْمِهِمْ فَجَآءُوهُم بِٱلْبَيِّنَٰتِ فَٱنتَقَمْنَا مِنَ ٱلَّذِينَ أَجْرَمُوا۟ ۖ وَكَانَ حَقًّا عَلَيْنَا نَصْرُ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٤٧﴾

47. Waxaan dhab ahaan ugu dirnay hortaa rasuullo qoomkoodii, waxayna ula yimaadeen xujooyin waana ka aarsannay kuwii dambi falay, waxaana korkannaga ah u gargaarka mu'miniinta.

ٱللَّهُ ٱلَّذِى يُرْسِلُ ٱلرِّيَٰحَ فَتُثِيرُ سَحَابًا فَيَبْسُطُهُۥ فِى ٱلسَّمَآءِ كَيْفَ يَشَآءُ وَيَجْعَلُهُۥ كِسَفًا فَتَرَى ٱلْوَدْقَ يَخْرُجُ

48. Alle waa kan diray dabaylaha oo markaas kicisa daruuro kuna fidiya samada, siduu doono, kana yeela goosimo aad aragtid

مِنْ خِلَٰلِهِۦ ۖ فَإِذَآ أَصَابَ بِهِۦ مَن يَشَآءُ مِنْ عِبَادِهِۦٓ إِذَا هُمْ يَسْتَبْشِرُونَ ﴿٤٨﴾

roobka oo ka soo bixi dhexdeeda, markuu Alle roobka siiyo cidduu doono oo addoommadiisa ka mid ahna markaasay bishaaraystaan.

وَإِن كَانُوا۟ مِن قَبْلِ أَن يُنَزَّلَ عَلَيْهِم مِّن قَبْلِهِۦ لَمُبْلِسِينَ ﴿٤٩﴾

49. Waxayna ahaayeen soo dajinta roobka ka hor kuwo quusan.

فَٱنظُرْ إِلَىٰٓ ءَاثَٰرِ رَحْمَتِ ٱللَّهِ كَيْفَ يُحْىِ ٱلْأَرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَآ ۚ إِنَّ ذَٰلِكَ لَمُحْىِ ٱلْمَوْتَىٰ ۖ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿٥٠﴾

50. Ee day naxariista Alle raadkeeda sida Alle ugu nooleeyo dhulka intuu dhintay ka dib, Allahaa wuxuu nooleeyaa wixii dhintay wax walbana waa karaa.

Roobka iyo naxariista Alle ayaa keena, si uu ugu nooleeyo addoommadiisa iyo dhulka ay ku nool yihiin korkiisa waana kan rasuullo badan u diray ummadihii hore iyagoo xaq wata kuwii beeniyeyna looga aarsaday, Alle waa u gargaare mu'mininta xaqa ah, keenidda roobka lagu farxina waxay ku tusin awoodda Alle iyo inuu wax walba karo. **[Ar-Ruum: 46-50].**

وَلَئِنْ أَرْسَلْنَا رِيحًا فَرَأَوْهُ مُصْفَرًّا لَّظَلُّوا۟ مِنۢ بَعْدِهِۦ يَكْفُرُونَ ﴿٥١﴾

51. Haddaan ku dirno dabaylo (daran) beertooda oo ay arkaan iyadoo doorsoon, waxay markaas ka dib noqdaan kuwo gaalooba.

فَإِنَّكَ لَا تُسْمِعُ ٱلْمَوْتَىٰ وَلَا تُسْمِعُ ٱلصُّمَّ ٱلدُّعَآءَ إِذَا وَلَّوْا۟ مُدْبِرِينَ ﴿٥٢﴾

52. Adigu wax ma maqashiin kartid kuwo dhintay, mid dhagala' oo jeedsadayna wax ma maqashiin kartid.

وَمَآ أَنتَ بِهَٰدِ ٱلْعُمْىِ عَن ضَلَٰلَتِهِمْ ۖ إِن تُسْمِعُ إِلَّا مَن يُؤْمِنُ بِـَٔايَٰتِنَا فَهُم مُّسْلِمُونَ ﴿٥٣﴾

53. Ruux indha la'na baadi kama hanuunin kartid, ma maqashiin kartid (xaqa) qolo rumeysay aayaadkannaga mooyee, muslimiinna ah.

٭ ٱللَّهُ ٱلَّذِى خَلَقَكُم مِّن ضَعْفٍ ثُمَّ جَعَلَ مِنۢ بَعْدِ ضَعْفٍ قُوَّةً ثُمَّ جَعَلَ مِنۢ بَعْدِ قُوَّةٍ ضَعْفًا وَشَيْبَةً ۚ

54. Alle waa kan idin ka abuuray tabaryari, haddana idinka yeelay tabaryari ka dib xoog, hadana xoog dabadi idinka yeelay

tabaryari iyo gabow, wuxuu doono yuu abuuraa, waana wax walba oge, wax walba kare.

يَخۡلُقُ مَا يَشَآءُۚ وَهُوَ ٱلۡعَلِيمُ ٱلۡقَدِيرُ ٥٤

Dabayshu waa qayb ka mid ah khalqiga Alle, waxna Alle waa ku anfacaa, marmarna waxay dhibtaa si loogu edbiyo kuwa leexda, inse la gaaloobo ma aha hadday dhibaato keento, xaqdiidana Alle uunbaa hanuunin kara ama muslimin kara, illeen Alle ayaa dadka mariya marxalado kala duwan, sida tabaryarida, xoogga, duqnimada iyo geeridaba, maxaa yeeley ogaansho iyo awoodba isagay ku dhammaadaan. **[Ar-Ruum: 51-54].**

55. Maalinta qiyaamadu kacdo waxay ku dhaartaan dambiilayaashu inayan nagaannin saacad mooyee, saasaana (xaqa) looga leexiyey.

وَيَوۡمَ تَقُومُ ٱلسَّاعَةُ يُقۡسِمُ ٱلۡمُجۡرِمُونَ مَا لَبِثُواْ غَيۡرَ سَاعَةٖۚ كَذَٰلِكَ كَانُواْ يُؤۡفَكُونَ ٥٥

56. Kuwii waxay dheheen cilmiga iyo iimaanka la siiyey waad ku nagaateen qadarka Alle (hore u qoray) tan iyo maalinta soobixinta, kanna waa maalintii soo bixinta, laakiin waxaad ahaydeen kuwo aan ogayn.

وَقَالَ ٱلَّذِينَ أُوتُواْ ٱلۡعِلۡمَ وَٱلۡإِيمَٰنَ لَقَدۡ لَبِثۡتُمۡ فِي كِتَٰبِ ٱللَّهِ إِلَىٰ يَوۡمِ ٱلۡبَعۡثِۖ فَهَٰذَا يَوۡمُ ٱلۡبَعۡثِ وَلَٰكِنَّكُمۡ كُنتُمۡ لَا تَعۡلَمُونَ ٥٦

57. Maanta (qiyaamada) ma anfacdo kuwii dulmiga falay cudur daar iyo toobad keen.

فَيَوۡمَئِذٖ لَّا يَنفَعُ ٱلَّذِينَ ظَلَمُواْ مَعۡذِرَتُهُمۡ وَلَا هُمۡ يُسۡتَعۡتَبُونَ ٥٧

58. Dhab ahaan baan ugu caddaynay dadka quraankan dhexdiisa tusaale kasta, haddaadna ula timaaddo aayad waxay dhihi kuwii gaaloobay waxaan baadil (xumaan) ahayn kuma sugnidin.

وَلَقَدۡ ضَرَبۡنَا لِلنَّاسِ فِي هَٰذَا ٱلۡقُرۡءَانِ مِن كُلِّ مَثَلٖۚ وَلَئِن جِئۡتَهُم بِـَٔايَةٖ لَّيَقُولَنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓاْ إِنۡ أَنتُمۡ إِلَّا مُبۡطِلُونَ ٥٨

59. Saasaa Alle u daboolaa quluubta kuwa aan ogayn (wax anfaca).

كَذَٰلِكَ يَطۡبَعُ ٱللَّهُ عَلَىٰ قُلُوبِ ٱلَّذِينَ لَا يَعۡلَمُونَ ٥٩

60. Ee samir yabooha Alle waa xaqe, yeyna ku fududayn kuwaan yaqiinsanayn (xaqa).

فَٱصۡبِرۡ إِنَّ وَعۡدَ ٱللَّهِ حَقّٞۖ وَلَا يَسۡتَخِفَّنَّكَ ٱلَّذِينَ لَا يُوقِنُونَ ٦٠

Saacadda qiyaame waa arrin daran oo culus gaalada dambiilayaasha ahna waqtigu wuu ka qasmi waxayna ku dhaaran dhibaatada darteed inayan adduunkii ku nagaannin saacad wax ka badan taasna waxay ku tusin inaan nicmada adduun iyo noloshiisa wax u tarayn ruuxii dhuma, mu'miniintase waa u xisaaban yahay waqtigu calaacalna wax ma taro qiyaame, illeen quraankaa Alle wax walba ku caddeeyaye, madax adayg iyo xaqdiidna waa dabeecadda gaalada, ee xaqa ku samra una adkaysta. Gaalana yeyna idin dhumin. **[Ar-Ruum: 55-60].**

Suurat Luqmaan

سُورَةُ لُقْمَٰنَ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxay ku tusin mucjisada quraanka (sida soo hormartay).

الٓمٓ ﴿١﴾

2. Tan waa aayaadka kitaabka (quraanka) ee xigmadda leh.

تِلْكَ ءَايَٰتُ ٱلْكِتَٰبِ ٱلْحَكِيمِ ﴿٢﴾

3. Waana hanuunka iyo naxariista samafalayaasha.

هُدًى وَرَحْمَةً لِّلْمُحْسِنِينَ ﴿٣﴾

4. Kuwa salaadda ooga, zakadana bixiya, iyagoo aakhiro yaqiinsan.

ٱلَّذِينَ يُقِيمُونَ ٱلصَّلَوٰةَ وَيُؤْتُونَ ٱلزَّكَوٰةَ وَهُم بِٱلْءَاخِرَةِ هُمْ يُوقِنُونَ ﴿٤﴾

5. Kuwaasi waxay ku sugan yihiin hanuun Alle, kuwaasina waa kuwa liibaanay.

أُو۟لَٰٓئِكَ عَلَىٰ هُدًى مِّن رَّبِّهِمْ ۖ وَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْمُفْلِحُونَ ﴿٥﴾

6. Dadka waxaa ka mid ah kuwo gadan hadal wax shuqliya si uu uga dhumiyo (dadka) jidka Alle iyagoon wax ogayn, jidka Alle na ku jees jeesa, kuwaasi waxay mudan cadaab dulleeya.

وَمِنَ ٱلنَّاسِ مَن يَشْتَرِى لَهْوَ ٱلْحَدِيثِ لِيُضِلَّ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ بِغَيْرِ عِلْمٍ وَيَتَّخِذَهَا هُزُوًا ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ لَهُمْ عَذَابٌ مُّهِينٌ ﴿٦﴾

7. Marka lagu akhriyo aayaadkannaga wuu jeedsadaa isagoo iskibrin, sidii isagoon maqal, oo dhagihiisu culus yihiin, ugu bishaaree cadaab daran.

وَإِذَا تُتْلَىٰ عَلَيْهِ ءَايَٰتُنَا وَلَّىٰ مُسْتَكْبِرًا كَأَن لَّمْ يَسْمَعْهَا كَأَنَّ فِىٓ أُذُنَيْهِ وَقْرًا ۖ فَبَشِّرْهُ بِعَذَابٍ أَلِيمٍ ﴿٧﴾

Macnaha aayadahan oo kale waxaa ka hadasha suuratul baqara oo ah in quraanku hanuun iyo naxariis u yahay sama falayaasha, wanaagga falay oo shareecada raacay, salaaddana oogay, zakadana bixiyey, aakhirana yiqiinsaday, kuwaasna waxaa u dambeeyn liibaan, kuwaas ka leexday jidka toosan, hadallada wax shuqliyana soo gata, kuna mashquula. Xaqana ku jees jeesa, marka quraanka lagu akhriyana jeedsada oo is kibriya sidii isaga oon maqal oo dhaga la' waxay mudan kuwaasu cadaab wax dulleeya oo daran. Cabdullaahi ibnu Mascuud wuxuu yidhi: Allaha isaga mooyee aan ilaah kale xaq lugu caabudin baan ku dhaaran hadalka wax shuqliya waa heesta.

Xasan Basrina saasoo kaluu yidhi waa heesta iyo durbaanka. **[Luqmaan: 1-7].**

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ لَهُمۡ جَنَّٰتُ ٱلنَّعِيمِ ٨

8. Kuwa rumeeyey (xaqa) camal wanaagsanna falay waxay mudan janatu naciima.

خَٰلِدِينَ فِيهَاۖ وَعۡدَ ٱللَّهِ حَقّٗاۚ وَهُوَ ٱلۡعَزِيزُ ٱلۡحَكِيمُ ٩

9. Iyagoo ku waari dhexdeeda waana yabooh Alle oo xaq ah, Alle na waa adkaade falsan.

خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ بِغَيۡرِ عَمَدٖ تَرَوۡنَهَاۖ وَأَلۡقَىٰ فِي ٱلۡأَرۡضِ رَوَٰسِيَ أَن تَمِيدَ بِكُمۡ وَبَثَّ فِيهَا مِن كُلِّ دَآبَّةٖۚ وَأَنزَلۡنَا مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءٗ فَأَنۢبَتۡنَا فِيهَا مِن كُلِّ زَوۡجٖ كَرِيمٍ ١٠

10. Isagaa abuuray samooyinka tiir aad aragtaan la'aantiis, dhulkana wuxuu ku tuuray buuro (suga) inayan dhaqdhaqaaqin, wuxuuna ku fidiyey dhexdiisa daabbad kasta, samadana waxaan ka soo dejinnay biyo, waxaanna ku soo bixinney nooc kasta oo quruxsan.

هَٰذَا خَلۡقُ ٱللَّهِ فَأَرُونِي مَاذَا خَلَقَ ٱلَّذِينَ مِن دُونِهِۦۚ بَلِ ٱلظَّٰلِمُونَ فِي ضَلَٰلٖ مُّبِينٖ ١١

11. Kaasi waa abuurkii Alle, ee i tusiya waxay abuureen kuwa ka soo hadhay Alle, saas ma aha, ee dulmi falayaashu waxay ku sugan yihiin baadi cad.

Kuwa liibaanay aakhiro waxaa ka mid ah kuwa Alle iyo rasuulladiisa rumeeyey, camallada waanaagsan ee shareecada waafaqsanna la yimaada, markaasuu Alle ku baraarujiyey qudradiisa siduu cirka u kor yeelay tiir aan aragno la'aantiis, dhulkana uu buuro ugu sugay, wax kasta oo noolna ugu beeray oo dhulka ku socda, cirkana biyo wax walba ku bixiyo ka soo dajiyey, waana kaas abuurka Alle ee maxay abuureen wax yaalaha kale ee la caabudo Alle ka sokow, ma jiro waxay abuureen ee ka caabudi yaa baadil cad ku sugan. **[Luqmaan: 8-11].**

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا لُقْمَٰنَ ٱلْحِكْمَةَ أَنِ ٱشْكُرْ لِلَّهِ ۚ وَمَن يَشْكُرْ فَإِنَّمَا يَشْكُرُ لِنَفْسِهِۦ ۖ وَمَن كَفَرَ فَإِنَّ ٱللَّهَ غَنِىٌّ حَمِيدٌ ﴿١٢﴾

12. Dhab ahaan ayaan luqmaan u siinnay xigmad iyo inuu Alle ku mahdiyo, ruuxii mahdiya wuxuu uun u mahdiyay naftiisa, ruuxii gaaloobana Alle waa ka kaaftoon yahay waana ammaanan yahay.

وَإِذْ قَالَ لُقْمَٰنُ لِٱبْنِهِۦ وَهُوَ يَعِظُهُۥ يَٰبُنَىَّ لَا تُشْرِكْ بِٱللَّهِ ۖ إِنَّ ٱلشِّرْكَ لَظُلْمٌ عَظِيمٌ ﴿١٣﴾

13. (Xusuuso) markuu ku yidhi luqmaan wiilkiisa isagoo waanin wiilkayow Alle waxba hala wadaajinnin, shirkigu waa dulmi weyne.

وَوَصَّيْنَا ٱلْإِنسَٰنَ بِوَٰلِدَيْهِ حَمَلَتْهُ أُمُّهُۥ وَهْنًا عَلَىٰ وَهْنٍ وَفِصَٰلُهُۥ فِى عَامَيْنِ أَنِ ٱشْكُرْ لِى وَلِوَٰلِدَيْكَ إِلَىَّ ٱلْمَصِيرُ ﴿١٤﴾

14. Waxaan u dardaarannay dadka labadiisii waalid, way sidday hooyadiis iyadoo tabar yar tabar yari kalana ku sugan, gudhidiisuna waa labo sano ee ku mahadi ani iyo labadaadii waalid, xaggaygaana loo ahaan.

وَإِن جَٰهَدَاكَ عَلَىٰٓ أَن تُشْرِكَ بِى مَا لَيْسَ لَكَ بِهِۦ عِلْمٌ فَلَا تُطِعْهُمَا ۖ وَصَاحِبْهُمَا فِى ٱلدُّنْيَا مَعْرُوفًا ۖ وَٱتَّبِعْ سَبِيلَ مَنْ أَنَابَ إِلَىَّ ۚ ثُمَّ إِلَىَّ مَرْجِعُكُمْ فَأُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿١٥﴾

15. Hadday kugula dadaalaan (labada waalid) inaad ii shariig yeesho (ila wadaajiso) waxaadan aqoon u lahayn ha ku adeecin kulana noolow adduunka si fiican, raacna jidka kuwa ii noqda, xaggayga yaa laydiin soo celin waxaana idiinka warrami waxaad camalfali jirteen.

Luqmaan wuxuu ahaa nin suubban oo ummadihii hore ka mid ah, Alle na siiyey cilmi naafic ah iyo caqli toosan, Alle na ku mahdin jiray, wiilkiisana wuxuu u dardaarmay dardaaran kii u fiicnaa oo ah inuu Alle kaliya caabudo, labada waalidna wanaag u falo, gaar ahaan hooyada u soo martay dhib daran uur iyo nuujinba, waxaa kaloos u dardaarmay in gaalimadu tahay dulmiga ugu wayn.

Mahadda Alle iyo kan labada waalid, xumaantoon lagu adeecin iyo gaalimada, in wanaag lagula noolaado, Alle jidkiisana lagu toosnaado, loona toobadkeeno, dhammaan waa waxyaalaha lays faray.

Macaad binu Jabal yaa istaagay isagoo khudbad akhrin wuxuuna ku mahdiyey Alle oo ammaanay markaasuu ku yidhi: anigu waxaan ahay rasuulkii

Rasuulka Alle miduu ugu soo diray xaggiinna inaad Alle caabuddaan, waxna la wadaajinnin, inaad i adeecdaan idinka hagran mahayo khayre, xagga Alle ayaa loo ahaane janno ama naare, waa nagaadi aan geedi lahayn, iyo waarid aan geeri lahayn. Waxaa wariyey Ibnu abii Xaatim, Ibnu Xajarna wuxuu yiri: sanadkiisu waa sax, markuu u tiiriyay musnadka Isxaaq binu Raahaweyhi. **[Luqmaan: 12-15].**

يَٰبُنَيَّ إِنَّهَآ إِن تَكُ مِثۡقَالَ حَبَّةٖ مِّنۡ خَرۡدَلٖ فَتَكُن فِي صَخۡرَةٍ أَوۡ فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ أَوۡ فِي ٱلۡأَرۡضِ يَأۡتِ بِهَا ٱللَّهُۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَطِيفٌ خَبِيرٞ ١٦

16. Wiilkayow hadday xumaantu tahay xabbad khardal ah oo kale (wax yar) oo sallax dhexdii ku sugnaato ama samooyinka dhexdooda ama dhulka dhexdiisa wuu keeni Alle, Alle na waa oge xeeldheer.

يَٰبُنَيَّ أَقِمِ ٱلصَّلَوٰةَ وَأۡمُرۡ بِٱلۡمَعۡرُوفِ وَٱنۡهَ عَنِ ٱلۡمُنكَرِ وَٱصۡبِرۡ عَلَىٰ مَآ أَصَابَكَۖ إِنَّ ذَٰلِكَ مِنۡ عَزۡمِ ٱلۡأُمُورِ ١٧

17. Wiilkayow oog salaadda, oo far wanaagga oo reeb waxa la naco kuna samir waxa ku gaadha, arrintaasu waxay ka mid tahay umuuraha Alle adkeeyay.

وَلَا تُصَعِّرۡ خَدَّكَ لِلنَّاسِ وَلَا تَمۡشِ فِي ٱلۡأَرۡضِ مَرَحًاۖ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُحِبُّ كُلَّ مُخۡتَالٖ فَخُورٖ ١٨

18. Hana ka jeedin wajiga dadka hana ugu socon dhulka kibir, Alle na ma jecla mid kasta oo isla weyn oo faan badane.

وَٱقۡصِدۡ فِي مَشۡيِكَ وَٱغۡضُضۡ مِن صَوۡتِكَۚ إِنَّ أَنكَرَ ٱلۡأَصۡوَٰتِ لَصَوۡتُ ٱلۡحَمِيرِ ١٩

19. Socodkaagana ku dhexdhexayso, hoosna u dhig codkaaga, cod waxaa ugu xun codka dameerahee.

أَلَمۡ تَرَوۡاْ أَنَّ ٱللَّهَ سَخَّرَ لَكُم مَّا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلۡأَرۡضِ وَأَسۡبَغَ عَلَيۡكُمۡ نِعَمَهُۥ ظَٰهِرَةٗ وَبَاطِنَةٗۗ وَمِنَ ٱلنَّاسِ مَن يُجَٰدِلُ فِي ٱللَّهِ بِغَيۡرِ عِلۡمٖ وَلَا هُدٗى وَلَا كِتَٰبٖ مُّنِيرٖ ٢٠

20. Miyeydaan arkayn in Alle idiin sakhiray waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan oo idin huwiyey nicmadiisa mid muuqata iyo mid qarsoonba, dadkana waxaa ka mid ah kuwo Alle ku murmi cilmi iyo hanuun iyo kitaab nuuriya la'aantiis.

وَإِذَا قِيلَ لَهُمُ ٱتَّبِعُواْ مَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ قَالُواْ بَلۡ نَتَّبِعُ مَا وَجَدۡنَا عَلَيۡهِ ءَابَآءَنَآۚ أَوَلَوۡ كَانَ ٱلشَّيۡطَٰنُ يَدۡعُوهُمۡ إِلَىٰ عَذَابِ ٱلسَّعِيرِ ﴿٢١﴾

21. Marka loo dhaho raaca waxa Alle soo dajiyeyna waxay dhahaan waxaannu raaci waxaan ka helnay aabayaalkanno, hadduu shaydaan ugu yeedhayo cadaabka saciirana (miyey raaci).

Wax kastoo ruuxu falo haba yaraadee Alle waa og yahay meel kaste ha ku jiree, dhagax, cir ama dhulba. Salaadda oo la oogo, wanaaggoo la faro dadka, xumaanta oo laga reebo, dhibka oo loo adkeysto, dadkoo si fiican loo qaabilo, dhulkoo si fiican loogu socdo, codkoo hoos loo dhigo iyo kibirkoo laga tagana waa wanaagga diinta islaamku farayso, Luqmaanna wiilkiisa u dardaarmey. Alle na wuu u nicmeeyey dadka, mana habboona muran xaq darro iyo raacid dad kale oo dhunsanaa iyo yeedhidda shaydaan. **[Luqmaan: 16-21].**

* وَمَن يُسۡلِمۡ وَجۡهَهُۥٓ إِلَى ٱللَّهِ وَهُوَ مُحۡسِنٞ فَقَدِ ٱسۡتَمۡسَكَ بِٱلۡعُرۡوَةِ ٱلۡوُثۡقَىٰۗ وَإِلَى ٱللَّهِ عَٰقِبَةُ ٱلۡأُمُورِ ﴿٢٢﴾

22. Ruuxii u jeediya wajigiisa xagga Alle isagoo samo fali wuxuu qabsaday guntin (ballan adag), xagga Alle ayaana cihdhibta arrimuhu u noqon.

وَمَن كَفَرَ فَلَا يَحۡزُنكَ كُفۡرُهُۥٓۚ إِلَيۡنَا مَرۡجِعُهُمۡ فَنُنَبِّئُهُم بِمَا عَمِلُوٓاْۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلِيمُۢ بِذَاتِ ٱلصُّدُورِ ﴿٢٣﴾

23. Ciddiise gaalowda yuuna ku walbahaar galin gaalnimadiisu, xaggannagay u soo noqon waxaanna uga warramaynaa waxay camalfali jireen, illeen Alle ayaa og waxa laabta ku sugane.

نُمَتِّعُهُمۡ قَلِيلٗا ثُمَّ نَضۡطَرُّهُمۡ إِلَىٰ عَذَابٍ غَلِيظٖ ﴿٢٤﴾

24. Waannu u raaxayn wax yar, markaasaannu u dhibaatayn (u iili) cadaab adag.

وَلَئِن سَأَلۡتَهُم مَّنۡ خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضَ لَيَقُولُنَّ ٱللَّهُۚ قُلِ ٱلۡحَمۡدُ لِلَّهِۚ بَلۡ أَكۡثَرُهُمۡ لَا يَعۡلَمُونَ ﴿٢٥﴾

25. Haddaad waydiisid yaa abuuray samooyinka iyo dhulka waxay odhan Ilaahay, waxaad dhahdaa mahad Alle ayaa iska leh, badankoodse ma oga.

لِلَّهِ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۚ إِنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلۡغَنِيُّ ٱلۡحَمِيدُ ﴿٢٦﴾

26. Alle ayaa iska leh waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan, Alle na waa hodan ammaanan.

Ciddii Alle u hoggaansanta wuxuu farayna yeesha oo wanaagsanaata wuxuu ku liibaani ballan adag iyo qabsasho xadhigga Alle, ruuxiise gaalooba isaga unbaa isdhibay, Alle na wuu sugi muddo yar wuxuuna ku abaal marin cadaab adag. Inkastoy gaaladu Alle diidi xagga daahirka haddana way ogyihiin in isagu abuuray cirka iyo dhulka. Mahadna Alle ayaa iska leh iyo xukunka cirka iyo dhulka waana hodan ammaan mutay. **[Luqmaan: 22-26].**

وَلَوْ أَنَّمَا فِي ٱلْأَرْضِ مِن شَجَرَةٍ أَقْلَٰمٌ وَٱلْبَحْرُ يَمُدُّهُۥ مِنۢ بَعْدِهِۦ سَبْعَةُ أَبْحُرٍ مَّا نَفِدَتْ كَلِمَٰتُ ٱللَّهِ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٢٧﴾

27. Hadday waxa dhulka ku sugan oo geeda ah qalimmo noqdaan badduna khadayso oo gadaasheeda todobo badood yihiin ma dhamaadeen kalimooyinka Alle, Alle na waa adkaade falsan.

مَّا خَلْقُكُمْ وَلَا بَعْثُكُمْ إِلَّا كَنَفْسٍ وَٰحِدَةٍ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ سَمِيعٌۢ بَصِيرٌ ﴿٢٨﴾

28. Abuurkiinna iyo soo bixintiinu ma aha sida naf kaliya mooyee (fudaydka), Alle na waa maqle arke ah.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ ٱللَّهَ يُولِجُ ٱلَّيْلَ فِي ٱلنَّهَارِ وَيُولِجُ ٱلنَّهَارَ فِي ٱلَّيْلِ وَسَخَّرَ ٱلشَّمْسَ وَٱلْقَمَرَ ۖ كُلٌّ يَجْرِىٓ إِلَىٰٓ أَجَلٍ مُّسَمًّى وَأَنَّ ٱللَّهَ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرٌ ﴿٢٩﴾

29. Miyeydaan ogayn in Alle habeenka dhex galiyo maalinta, maalintana dhexgaliyo habeenka sakhirayna qorraxda iyo dayaxa, mid kastana uu u socdo muddo magacaaban, Alle na waxaad camal falaysaan waa og yahay.

ذَٰلِكَ بِأَنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلْحَقُّ وَأَنَّ مَا يَدْعُونَ مِن دُونِهِ ٱلْبَٰطِلُ وَأَنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلْعَلِىُّ ٱلْكَبِيرُ ﴿٣٠﴾

30. Taasna waa in Alle xaq yahay waxay caabudi ee ka soo hadhayna baadil yahay iyo in Alle yahay sarreeye wayn.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ ٱلْفُلْكَ تَجْرِى فِي ٱلْبَحْرِ بِنِعْمَتِ ٱللَّهِ لِيُرِيَكُم مِّنْ ءَايَٰتِهِۦٓ ۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَءَايَٰتٍ لِّكُلِّ صَبَّارٍ شَكُورٍ ﴿٣١﴾

31. Miyeydaan ogayn in doontu dhexsocoto badda nicmada Alle darteed si uu idiin tusiyo aayaadkiisa, arrintaasna aayaad baa ugu sugan samirbadane shugri badan oo dhan.

وَإِذَا غَشِيَهُم مَّوْجٌ كَٱلظُّلَلِ دَعَوُاْ ٱللَّهَ مُخْلِصِينَ لَهُ ٱلدِّينَ فَلَمَّا نَجَّىٰهُمْ إِلَى ٱلْبَرِّ فَمِنْهُم مُّقْتَصِدٌ ۚ وَمَا يَجْحَدُ بِـَٔايَـٰتِنَآ إِلَّا كُلُّ خَتَّارٍ كَفُورٍ ﴿٣٢﴾

32. Marka hirku daboolo dadka oo hoos iyo daruuro la moodo waxay baryaan Alle iyagoo u kali yeeli diinta (cibaadada) markuu u koriyo xagga barrigana waxaa ka mid noqon dadka mid dhexdhexeysan, mana diido aayaadkannaga mid khaa'in ah oo gaalnimo badan mooyee.

Cilmiga Ilaahay waa waasac haddii geedaha qalin laga dhigo badahana anqaas ma dhammaado cilmigiisu, Alle na waa u fududdahay abuuridda iyo soo bixintuba, waana Allaha nusqaamiya habeenka iyo dharaarta sakhirayna qorraxda iyo dayaxaba inta muddadoodii laga gaadhi. Waana Allaha xaqa ah waxa ka soo hadhay ee la caabudana wax ka jirin ee sarreeye weyn ah dadkana u sahlay markabka badda dhexsocda, si ay ugu mahdiyaan nicmadiisa, markey badda marina Alle ayay baryaan gaaladu, markey nabadgalaanna way jeedsadaan. Rasuulkuna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): Allow ma koobno ammaantaada ee waa saad adigu isu ammaantay. Muslim ayaa wariyey. **[Luqmaan: 27-32].**

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ ٱتَّقُواْ رَبَّكُمْ وَٱخْشَوْاْ يَوْمًا لَّا يَجْزِى وَالِدٌ عَن وَلَدِهِۦ وَلَا مَوْلُودٌ هُوَ جَازٍ عَن وَالِدِهِۦ شَيْـًٔا ۚ إِنَّ وَعْدَ ٱللَّهِ حَقٌّ ۖ فَلَا تَغُرَّنَّكُمُ ٱلْحَيَوٰةُ ٱلدُّنْيَا وَلَا يَغُرَّنَّكُم بِٱللَّهِ ٱلْغَرُورُ ﴿٣٣﴾

33. Dadow ka dhawrsada Allihiin oo ka cabsada maalin uusan waxba ka deeqayn waalid ilmihiisa, ilmuhuna waalidka waxba, yabooha Alle na waa xaq, ee yeyna idin kedin nolosha adduunyo, yuuna idinku kedin Alle kedin badane (shaydaan).

إِنَّ ٱللَّهَ عِندَهُۥ عِلْمُ ٱلسَّاعَةِ وَيُنَزِّلُ ٱلْغَيْثَ وَيَعْلَمُ مَا فِى ٱلْأَرْحَامِ ۖ وَمَا تَدْرِى نَفْسٌ مَّاذَا تَكْسِبُ غَدًا ۖ وَمَا تَدْرِى نَفْسٌۢ بِأَىِّ أَرْضٍ تَمُوتُ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلِيمٌ خَبِيرٌ ﴿٣٤﴾

34. Alle agtiisuu yahay ogaanshaha saacadda (qiyaame) iyo roob di'iddu, wuxuuna og yahay waxa makaanka (ilma galeenka) ku sugan, nafna ma oga waxay mudan barri, nafna ma oga dhulkay ku dhiman, Alle ayaa og xeelna dheer.

Dhab ahaan nolosha adduun waa dhalanteed, ruuxu suu doono ha ugu raaxaystee, ciddii caqli lehna waa inay camalfashaa ayna dhagraminna. Maxaa yeeley waxaa imaan maalin cidna cid kale ayan wax u tarayn, xaataa labada is dhashayba ha ahaatee. Qiyaamadu markey dhici, roobku markuu di'i iyo waxa uurka ku jiraba Alle ayaa og, nafna ma oga waxay mudan barri iyo halkey ku dhiman midna, Alle unbaa og.

Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: shan Ilaahay unbaa og: saacadda qiyaame, roob kolkuu imaan, waxa uurka ku jira, nafi waxay mudan wakhtiga soo socda iyo nafi meeley ku dhiman.

Waxaa wariyey Bukhaari iyo Axmed. Waxa kalase ee la sheeg sheego waa male iyo war. Cilmiga dhabta ahse Alle agtiisuu jiraa. **[Luqmaan: 33-34].**

Suurat As-Sajdah

سُورَةُ السَّجۡدَةِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxay ku tusin mucjisada quraanka.

الٓمٓ ﴿١﴾

2. Soo dajinta quraanka shaki kuma jiro, wuxuuna ka soo dagay Rabbiga caalamka xaggiisa.

تَنزِيلُ ٱلۡكِتَٰبِ لَا رَيۡبَ فِيهِ مِن رَّبِّ ٱلۡعَٰلَمِينَ ﴿٢﴾

3. Mise waxay dhihi waxaa been abuurtay (Nabiga), saas ma aha ee waa xaq quraanku Allehaa xaggiisa ka yimid si aad ugu digtid qoom uusan u imaannin dige kaa horreeyay, si ay u hanuunaan.

أَمۡ يَقُولُونَ ٱفۡتَرَىٰهُۖ بَلۡ هُوَ ٱلۡحَقُّ مِن رَّبِّكَ لِتُنذِرَ قَوۡمٗا مَّآ أَتَىٰهُم مِّن نَّذِيرٖ مِّن قَبۡلِكَ لَعَلَّهُمۡ يَهۡتَدُونَ ﴿٣﴾

4. Alle waa kan ku abuuray samooyinka, iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya lix maalmood dhexdeed, markaasna ka sara maray carshiga idiinmana sugnaannin Alle ka sokow wali (gargaare) iyo shafeece midna, ee miyeydaan wax xusuusanayn.

ٱللَّهُ ٱلَّذِي خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضَ وَمَا بَيۡنَهُمَا فِي سِتَّةِ أَيَّامٖ ثُمَّ ٱسۡتَوَىٰ عَلَى ٱلۡعَرۡشِۖ مَا لَكُم مِّن دُونِهِۦ مِن وَلِيّٖ وَلَا شَفِيعٍۚ أَفَلَا تَتَذَكَّرُونَ ﴿٤﴾

5. Amarka Alle ayaa maamula, kana soo dejiya samada una soo dejiya xagga dhulka, markaasaa amarkaasi xagga Alle u koraa maalin qaddarkeedu yahay kun sano oo waxaad tirinaysaana.

يُدَبِّرُ ٱلۡأَمۡرَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ إِلَى ٱلۡأَرۡضِ ثُمَّ يَعۡرُجُ إِلَيۡهِ فِي يَوۡمٖ كَانَ مِقۡدَارُهُۥٓ أَلۡفَ سَنَةٖ مِّمَّا تَعُدُّونَ ﴿٥﴾

ذَٰلِكَ عَٰلِمُ ٱلْغَيْبِ وَٱلشَّهَٰدَةِ ٱلْعَزِيزُ ٱلرَّحِيمُ ﴿٦﴾

6. Kaasina waa Allaha og waxa maqan iyo waxa joogaba, ee adkaada ee naxariista.

Alle wuxuu halkan ku sheegay inuu quraanku ka soo dagay xagga Alle, wax shaki ahna ku jirin, wax Nabiga Muxamed ah jeebkiisa kala yimidna ahayn, si loogu digo dad jaahiliin ah oon hadda ka hor wax u diga helin, waxaa kalooy aayaduhu caddayn inuu Ilaahay ku abuuray samooyinka, dhulka, iyo waxa u dhaxeeye lix maalmood, wax Alle ka soo hadhay oo wax anfici karaana uusan jirin idam Alle la'aantiis, wax walbana isagaa maamula, wax walbana waa ogyahay. **[As-Sajdah: 1-6].**

ٱلَّذِىٓ أَحْسَنَ كُلَّ شَىْءٍ خَلَقَهُۥ ۖ وَبَدَأَ خَلْقَ ٱلْإِنسَٰنِ مِن طِينٍ ﴿٧﴾

7. Alle ayaa wanaajiyey abuuridda wax kasta, wuxuuna ka billaabay abuuridda dadka dhoobo, (Nabigii Aadam ahaa).

ثُمَّ جَعَلَ نَسْلَهُۥ مِن سُلَٰلَةٍ مِّن مَّآءٍ مَّهِينٍ ﴿٨﴾

8. Markaas ka yeelay faraciisii mid ka soo taxma biyo tabar yar.

ثُمَّ سَوَّىٰهُ وَنَفَخَ فِيهِ مِن رُّوحِهِۦ ۖ وَجَعَلَ لَكُمُ ٱلسَّمْعَ وَٱلْأَبْصَٰرَ وَٱلْأَفْـِٔدَةَ ۚ قَلِيلًا مَّا تَشْكُرُونَ ﴿٩﴾

9. Markaas ekeeyey oo ruuxdiisa ku afuufay idiinna yeelay maqal, aragyaal iyo quluubba, waxyar baadse Alle ku mahdisaan.

وَقَالُوٓا۟ أَءِذَا ضَلَلْنَا فِى ٱلْأَرْضِ أَءِنَّا لَفِى خَلْقٍ جَدِيدٍ ۢ بَلْ هُم بِلِقَآئِ رَبِّهِمْ كَٰفِرُونَ ﴿١٠﴾

10. Waxay dhaheen gaaladii ma markaan ku dhexlunno dhulka (oon carro isu beddelno) yaa abuurid cusub nala abuuri, saas ma aha ee iyagu la kulanka Rabbigood bay ka gaaloobeen.

* قُلْ يَتَوَفَّىٰكُم مَّلَكُ ٱلْمَوْتِ ٱلَّذِى وُكِّلَ بِكُمْ ثُمَّ إِلَىٰ رَبِّكُمْ تُرْجَعُونَ ﴿١١﴾

11. Waxaad dhahdaa waxaa idin oofsan (dili) malagga mowdka laydiin wakiishay, markaasaa xagga Allihiin laydiin celin.

وَلَوْ تَرَىٰٓ إِذِ ٱلْمُجْرِمُونَ نَاكِسُوا۟ رُءُوسِهِمْ عِندَ رَبِّهِمْ رَبَّنَآ أَبْصَرْنَا وَسَمِعْنَا فَٱرْجِعْنَا نَعْمَلْ صَٰلِحًا إِنَّا مُوقِنُونَ ﴿١٢﴾

12. Haddaad arki lahayd marka dambiilayaashu madaxa hoos u dhigi (qiyaamada) Rabbigood agtiisa (iyagoo dhihi)

Rabbigeenow waan aragnay waana maqalnay ee na celi si aan camal fiican u fallo, waan yaqiininnaye (waxaad arki lahayd wax yaab leh).

13. Haddaan doonno waxaan siin lahayn (ku toosin lahayn) naf kasta hanuunkeeda hase yeeshee waxaa hormaray hadalkaygii in laga buuxin jahannamo jinni iyo insi dhammaan.

وَلَوْ شِئْنَا لَآتَيْنَا كُلَّ نَفْسٍ هُدَىٰهَا وَلَٰكِنْ حَقَّ ٱلْقَوْلُ مِنِّى لَأَمْلَأَنَّ جَهَنَّمَ مِنَ ٱلْجِنَّةِ وَٱلنَّاسِ أَجْمَعِينَ ﴿١٣﴾

14. Ee dhadhamiya (cadaabka) halmaanshihiinnii la kulanka maalintiinnan (qiyaame) sababtii, annaguna waan idinka tagaynaa (maanta) ee dhadhamiya cadaabka waaridda camalkiinnii dartiis.

فَذُوقُوا۟ بِمَا نَسِيتُمْ لِقَآءَ يَوْمِكُمْ هَٰذَآ إِنَّا نَسِينَٰكُمْ ۖ وَذُوقُوا۟ عَذَابَ ٱلْخُلْدِ بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿١٤﴾

Wax walba Alle ayaa abuuray, wanaajiyeyna abuurkiisa, Nabi Aadamna dhoobo ka abuuray faraciisana biyo ka ahaysiiyay, ruux, maqal, arag iyo caqlina u yeelay, laakiin dadku waxyar bay Alle ku mahdiyaan.

Gaaladuna waxayba diidi soo bixinta iyo la kulanka Rabbigood, waxaase dhab ah inay dhiman Alle na ay u noqon maalinta qiyaame, iyagoo dullaysan oo madaxa raaricin, oo xumaan oo idil qirsan, Alle na ay warsan in adduunkii dib loogu celiyo si ay camal fiican u falaan, hasa yeeshee calaacal wax uma taro maalintaas, cadaab iyo dulli joogta ah yayna la kulmi. Mujaahid wuxuu yidhi: malakumowd waxaa loo koobay dhulka oo looga dhigay weel oo kale uu wax ka qaadan markuu rabo. **[As-Sajdah: 7-14].**

15. Waxaa uun rumayn aayaadkannaga kuwa marka lagu waaniyo aayadaha sujuud la dhaca kuna tasbiixsada mahadda Rabbigood iyagoon is kibrinayn (isla waynayn).

إِنَّمَا يُؤْمِنُ بِـَٔايَٰتِنَا ٱلَّذِينَ إِذَا ذُكِّرُوا۟ بِهَا خَرُّوا۟ سُجَّدًا وَسَبَّحُوا۟ بِحَمْدِ رَبِّهِمْ وَهُمْ لَا يَسْتَكْبِرُونَ ۩ ﴿١٥﴾

تَتَجَافَىٰ جُنُوبُهُمْ عَنِ ٱلْمَضَاجِعِ
يَدْعُونَ رَبَّهُمْ خَوْفًا وَطَمَعًا وَمِمَّا
رَزَقْنَٰهُمْ يُنفِقُونَ ﴿١٦﴾

16. Waxayna ka dheeraataa dhinacyadoodu jiifka iyagoo baryi Rabbigood cabsi iyo rajaynba waxaan ku arzuqnayna wax ka bixiya.

فَلَا تَعْلَمُ نَفْسٌ مَّآ أُخْفِىَ لَهُم مِّن قُرَّةِ
أَعْيُنٍ جَزَآءًۢ بِمَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿١٧﴾

17. Ma oga nafu waxa loo qariyay kuwaas oo ah wax indho ku qaboowsadaan; abaal marin waxay camal falayeen dartiis.

أَفَمَن كَانَ مُؤْمِنًا كَمَن كَانَ فَاسِقًا ۚ لَّا
يَسْتَوُۥنَ ﴿١٨﴾

18. Ruux mu'min ah ma la mid baa mid faasiq ah, ma eka.

أَمَّا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ
فَلَهُمْ جَنَّٰتُ ٱلْمَأْوَىٰ نُزُلًۢا بِمَا كَانُوا۟
يَعْمَلُونَ ﴿١٩﴾

19. Kuwa rumeeyay (xaqa) oo camal fiican falay waxay mudan jannooyinka ma'wa; martiqaad waxay camal falayeen dartiis.

وَأَمَّا ٱلَّذِينَ فَسَقُوا۟ فَمَأْوَىٰهُمُ ٱلنَّارُ ۖ كُلَّمَآ
أَرَادُوٓا۟ أَن يَخْرُجُوا۟ مِنْهَآ أُعِيدُوا۟ فِيهَا
وَقِيلَ لَهُمْ ذُوقُوا۟ عَذَابَ ٱلنَّارِ ٱلَّذِى
كُنتُم بِهِۦ تُكَذِّبُونَ ﴿٢٠﴾

20. Kuwase faasiqoobay waxay ku hoyan naar, markay doonaan inay ka baxaanna waa lagu celin dhexdeeda waxaana lagu dhihi dhadhamiya cadaabka naartii aad beenin jirteen.

وَلَنُذِيقَنَّهُم مِّنَ ٱلْعَذَابِ ٱلْأَدْنَىٰ دُونَ
ٱلْعَذَابِ ٱلْأَكْبَرِ لَعَلَّهُمْ يَرْجِعُونَ ﴿٢١﴾

21. Waxaanna dhadhansiinaynaa cadaab soke cadaab wayn ka sokow inay noqdaan darteed.

وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّن ذُكِّرَ بِـَٔايَٰتِ رَبِّهِۦ
ثُمَّ أَعْرَضَ عَنْهَآ ۚ إِنَّا مِنَ ٱلْمُجْرِمِينَ
مُنتَقِمُونَ ﴿٢٢﴾

22. Yaa ka dulmi badan ruux lagu waaniyay aayaadka Allehiis oo ka jeedsaday xaggeeda, annaguna dambiilayaasha waan ka aarsanaynaa.

Habeenka oo la cibaadaysto waxay sabab u noqotaa galidda jannada Alle, iyadoo Alle laga cabsan lana rajayn, xoolahana wax laga bixiyo, kuwaasina wax wayn buu Alle u darbay. Abuu hurayre waxaa laga wariyay in Rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) yidhi: Alle wuxuu yidhi: addoomadayda wanaagsan waxaan u darbay waxaan ili arkin, dhagna maqlin,

kuna soo dhicin qalbi dad. Wuxuuna akhriyay aayaddan. (Waxaa weriyay Bukhaari iyo Muslim iyo kuwo kale).

Mana sinna mu'min wanaagsan iyo faasiq leexday, mu'minku jannuu gali, faasiqana waxaa lagu abaalmarin naar, waxaana loo soo hormariyaa ciqaabo yar yar ka hor mid wayn bal inay noqdaan. Dhabtuna waa inaan cidna ka dulmi badnayn ruux quraanka lagu waaniyay oo ka jeedsaday, wuxuuna la mid noqon dambiilayaasha Alle ka aarsado.

Qataade wuxuu yidhi: iska jira ka jeedsashada xuska Alle, ruuxii ka jeedsada xuskiisa wuxuu kadsoomay kadsoomidda u wayn, wuxuuna is waynsiiyay iswayneysiin daran. **[As-Sajdah: 15-22].**

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا مُوسَى ٱلْكِتَٰبَ فَلَا تَكُن فِى مِرْيَةٍ مِّن لِّقَآئِهِۦ ۖ وَجَعَلْنَٰهُ هُدًى لِّبَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ﴿٢٣﴾

23. Dhab ahaan baan u siinnay Nabi Muuse kitaabkii (tawreed) ee ha shakiyin la kulankiisa waxaanna ka yeellay kitaabkaas hanuunka Banii Israa'iil.

وَجَعَلْنَا مِنْهُمْ أَئِمَّةً يَهْدُونَ بِأَمْرِنَا لَمَّا صَبَرُوا۟ ۖ وَكَانُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا يُوقِنُونَ ﴿٢٤﴾

24. Waxaanna ka yeellay qaar ka mid ah imaamyo ku hanuuniya amarkannaga markay samreen, waxayna ahaayeen kuwa aayaadkannaga yaqiiniya.

إِنَّ رَبَّكَ هُوَ يَفْصِلُ بَيْنَهُمْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ فِيمَا كَانُوا۟ فِيهِ يَخْتَلِفُونَ ﴿٢٥﴾

25. Allehaa baana kala bixin dhexdooda maalinta qiyaame waxay ahaayeen kuwo isku diiddan.

أَوَلَمْ يَهْدِ لَهُمْ كَمْ أَهْلَكْنَا مِن قَبْلِهِم مِّنَ ٱلْقُرُونِ يَمْشُونَ فِى مَسَٰكِنِهِمْ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَٰتٍ ۖ أَفَلَا يَسْمَعُونَ ﴿٢٦﴾

26. Miyeyna u caddaannin kuwaasi intaan halaagnay hortood oo quruun ah oy ku dhex socon guryahoodii, taasina waxaa ku sugan calaamado ee miyeyna wax maqlaynin.

أَوَلَمْ يَرَوْا۟ أَنَّا نَسُوقُ ٱلْمَآءَ إِلَى ٱلْأَرْضِ ٱلْجُرُزِ فَنُخْرِجُ بِهِۦ زَرْعًا تَأْكُلُ مِنْهُ أَنْعَٰمُهُمْ وَأَنفُسُهُمْ ۖ أَفَلَا يُبْصِرُونَ ﴿٢٧﴾

27. Miyeyna arkeyn inaan u soo kaxayno biyaha dhul abaar ah oon markaas ku soo bixinno beero ay wax ka cunaan

xoolahooda iyo naftooduba miyeyna wax arkaynin.

28. Waxay dhihi waa goorma kala xukunku haddaad run sheegaysaan.

29. Waxaad dhahdaa maalinta kala xukunka gaalada ma anfaco iimaankoodu lamana sugo.

30. Ee isaga jeedso oo sug iyana ha sugeene.

وَيَقُولُونَ مَتَىٰ هَٰذَا ٱلْفَتْحُ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٢٨﴾

قُلْ يَوْمَ ٱلْفَتْحِ لَا يَنفَعُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓا۟ إِيمَٰنُهُمْ وَلَا هُمْ يُنظَرُونَ ﴿٢٩﴾

فَأَعْرِضْ عَنْهُمْ وَٱنتَظِرْ إِنَّهُم مُّنتَظِرُونَ ﴿٣٠﴾

Alle wuxu sheegay inuu diray Nabi Muuse oo siiyay kitaabkii tawreed, Nabigana wuxuu faray inuusan shakiyin la kulankiisa, kitaabkaasuna wuxuu hanuun u ahaa Bini Israa'iil oo qaar ka mid ah imaamyo laga dhigay markay toosnaadeen.

Alle ayaana dadka kala bixin qiyaamada waxay isku diiddanaayeen adduunka, dadkuna waa inay ku waana qaataan ummadihii ka horreeyey ee la halaagay iyo sida Alle u nooleeyo dhul dhintay oo abaaroobay uguna soo bixiyo cunno lagu noolaado.

Tan kale ma habboona in la dadajisto imaatinka saacadda qiyaame, illeen markay timaado gaal wax uma tarto rumayne, waxayna ku dhammaatay suuraddu in lala sugo gaalada abaalkooda.

Sufyaan wuxuu yidhi: saasay noqdeen kuwaasi kumana habboona ruux inuu noqdo imaam lagu daydo intuusan adduunyada iska qabannin.

Mar la waydiiyay Sufyaan hadalkii sayid Cali: samirku iimaanka wuxuu u yahay sida madaxu jidhka u yahay, wuxuu yidhi: markay qabsadeen amarka madixiisii yey noqdeen madax. **[As-Sajdah: 23-30].**

Suurat Al-Axzaab

سُورَةُ الأَحْزَابِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Nabiyow ka dhawrso (ka yaab) Alle hana adeecin gaalada iyo munaafiqiinta, Alle na waa oge falsan.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِيُّ ٱتَّقِ ٱللَّهَ وَلَا تُطِعِ ٱلْكَٰفِرِينَ وَٱلْمُنَٰفِقِينَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿١﴾

2. Raacna waxa lagaaga waxyoon xagga Allehaa, Alle na waxaad camal falaysaan waa og yahay.

وَٱتَّبِعْ مَا يُوحَىٰٓ إِلَيْكَ مِن رَّبِّكَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرًا ﴿٢﴾

3. Talana saaro Alle, Alle ayaana ku filan wakiile.

وَتَوَكَّلْ عَلَى ٱللَّهِ ۚ وَكَفَىٰ بِٱللَّهِ وَكِيلًا ﴿٣﴾

4. Ma yeelin Alle laba qalbi ruux laabtiis, mana yeelin haweenkiinna aad dihaaraysaanna (ka dhaaranaysaanna) hooyooyinkiin oo kale, mana yeelin kuwaad sheegateenna caruurtiinna oo kale, taasi waa hadalka afkiinna uun, Alle na wuxuu sheegi xaqa, isagaana ku hanuuniya jidka (toosan).

مَّا جَعَلَ ٱللَّهُ لِرَجُلٍ مِّن قَلْبَيْنِ فِى جَوْفِهِۦ ۚ وَمَا جَعَلَ أَزْوَٰجَكُمُ ٱلَّٰٓـِٔى تُظَٰهِرُونَ مِنْهُنَّ أُمَّهَٰتِكُمْ ۚ وَمَا جَعَلَ أَدْعِيَآءَكُمْ أَبْنَآءَكُمْ ۚ ذَٰلِكُمْ قَوْلُكُم بِأَفْوَٰهِكُمْ ۖ وَٱللَّهُ يَقُولُ ٱلْحَقَّ وَهُوَ يَهْدِى ٱلسَّبِيلَ ﴿٤﴾

5. Ugu yeedha kuwaas aabayaalkood saasaa ku cadaalo badan Alle agtiise, haddaydaan aqoonnin aabayaalkoodna waa walaalihiinna diinta iyo sokeeyihiinna, korkiinnana dhib ma saarra

ٱدْعُوهُمْ لِءَابَآئِهِمْ هُوَ أَقْسَطُ عِندَ ٱللَّهِ ۚ فَإِن لَّمْ تَعْلَمُوٓا۟ ءَابَآءَهُمْ فَإِخْوَٰنُكُمْ فِى ٱلدِّينِ وَمَوَٰلِيكُمْ ۚ وَلَيْسَ عَلَيْكُمْ جُنَاحٌ فِيمَآ أَخْطَأْتُم بِهِۦ وَلَٰكِن

مَّا تَعَمَّدَتْ قُلُوبُكُمْۚ وَكَانَ ٱللَّهُ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿٥﴾

waxaad ku gaftaan, hasa yeeshee waxay u kasto quluubtiinnu (yaa laydin waydiin), Alle na waa dambi dhaafe naxariista.

Suuraddan waxaa lagu magacaabaa suuratu Axsaab, Alle na wuxuu Nabiga Muxamed ah (ammaan iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) u dardaarmay cabsida Alle iyo inuusan adeecin gaalada iyo munaafiqiinta, raacana waxa Alle u waxyooday, talana saarto Alle isagaa ku filan wixii loo talo saartee. Waxaana jirta inaan laabu laba qalbi lahayn. Haweenka lagu sheego inay hooyo la mid yihiinna hooya ma noqdaan, caruurtaad sheegataan idin kood dhalinna ilmihiinnii dhabta ahaa ma aha, ee waa in aabahood loogu yeedho, hadaydaan aqoonna waa walaalihiinna diinta islaamka. Gafna Alle dadka uma qabto waxaase loo qabtaa wuxuu qalbigoodu u kaso. Nabigana (ammaan iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Alle sarreeye wuxuu ummadda ka saamaxay gafka, halmaanka iyo waxa lagu qasbo. **[Al-Axzaab: 1-5].**

٦. ٱلنَّبِيُّ أَوْلَىٰ بِٱلْمُؤْمِنِينَ مِنْ أَنفُسِهِمْۖ وَأَزْوَٰجُهُۥٓ أُمَّهَٰتُهُمْۗ وَأُوْلُوا۟ ٱلْأَرْحَامِ بَعْضُهُمْ أَوْلَىٰ بِبَعْضٍ فِى كِتَٰبِ ٱللَّهِ مِنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ وَٱلْمُهَٰجِرِينَ إِلَّآ أَن تَفْعَلُوٓا۟ إِلَىٰٓ أَوْلِيَآئِكُم مَّعْرُوفًاۚ كَانَ ذَٰلِكَ فِى ٱلْكِتَٰبِ مَسْطُورًا ﴿٦﴾

6. Nabigaa uga roon (turid badan) mu'mininta naftooda, haweenkiisuna waa hooyooyinkood (xagga ixtiraamka iyo inay xaaraan idinka yihiin), qaraabaduna iyagaa qaarkood qaarka kale kaga mudan kitaabka Alle, mu'mininta (kale) iyo muhaajiriinta, inaad wanaag u fashaan kuwa aad weliga ka dhigateen (oo aad is walaashateen) mooyee, xukunkaasna wuxuu ku qoran yahay kitaabka.

٧. وَإِذْ أَخَذْنَا مِنَ ٱلنَّبِيِّـۧنَ مِيثَٰقَهُمْ وَمِنكَ وَمِن نُّوحٍ وَإِبْرَٰهِيمَ وَمُوسَىٰ وَعِيسَى ٱبْنِ مَرْيَمَۖ وَأَخَذْنَا مِنْهُم مِّيثَٰقًا غَلِيظًا ﴿٧﴾

7. «Xusuuso» markaan ka qaadnay Nabiyada ballankoodii iyo adiga iyo Nuux, Ibraahim, Muuse iyo Ciise ibnu Maryam, oo ka qaadnay ballan adag.

٨. لِّيَسْـَٔلَ ٱلصَّٰدِقِينَ عَن صِدْقِهِمْۚ وَأَعَدَّ لِلْكَٰفِرِينَ عَذَابًا أَلِيمًا ﴿٨﴾

8. Si Alle u warsado kuwa runlayaasha ah runtooda, gaaladana wuxuu u darbay cadaab daran.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱذۡكُرُواْ نِعۡمَةَ ٱللَّهِ عَلَيۡكُمۡ إِذۡ جَآءَتۡكُمۡ جُنُودٞ فَأَرۡسَلۡنَا عَلَيۡهِمۡ رِيحٗا وَجُنُودٗا لَّمۡ تَرَوۡهَاۚ وَكَانَ ٱللَّهُ بِمَا تَعۡمَلُونَ بَصِيرًا ٩

9. Kuwa (xaqa) rumeeyow xusuusta Alle siduu idiinku nicmeeyey, markay junuud (askar) idiin timid markaas oon ku dirnay dabayl iyo askar iyadoy aydaan arkayn, Alle na waxaad camal falaysaan waa arkaa.

إِذۡ جَآءُوكُم مِّن فَوۡقِكُمۡ وَمِنۡ أَسۡفَلَ مِنكُمۡ وَإِذۡ زَاغَتِ ٱلۡأَبۡصَٰرُ وَبَلَغَتِ ٱلۡقُلُوبُ ٱلۡحَنَاجِرَ وَتَظُنُّونَ بِٱللَّهِ ٱلظُّنُونَا ١٠

10. Xusuusta markay idinkaga yimaadeen kor iyo hoosba, indhuhuna iisheen quluubtuna dhuunta gaadhay Alle na aad u maleyseen malooyin.

Nabiga rumeyntiisa iyo adeeciddiisa yaa mu'miniinta uga xaq badan naftooda. Haweenka Nabigana waa hooyooyinka mu'miniinta, qaraabaduna waxay mudan tahay dhawrid. Alle waxaa kale oo uu inoo caddeeyey inuu ballan adag ka qaaday Nabiyadii si ay xaqa u gutaan, siiba Nabi Muxamad, Nuux, Ibraahim, Muuse iyo Ciise, si ruuxa runlaha ah khayr loogu abaalmariyo loona warsado, gaaladana loo ciqaabo, Alle na mu'miniintii ree Madiino ee Nabigu la noolaa wuxuu xusuusiyey dagaalkii xisbiyadu ay dhan kastaba kaga yimaadeen madiino oo aad loo cabsaday, indhuhuna taagmeen, wadnuhuna dhuunta yimid, Alle na shar laga malaystay markaas dabayl iyo col aan la arkayn gaaladii Alle ku diray, mu'miniintiina u gargaaray. **[Al-Axzaab: 6-10].**

هُنَالِكَ ٱبۡتُلِيَ ٱلۡمُؤۡمِنُونَ وَزُلۡزِلُواْ زِلۡزَالٗا شَدِيدٗا ١١

11. Halkaasaa lagu imtixaamay mu'miniinta gilgilid daranna lagu gil gilay.

وَإِذۡ يَقُولُ ٱلۡمُنَٰفِقُونَ وَٱلَّذِينَ فِي قُلُوبِهِم مَّرَضٞ مَّا وَعَدَنَا ٱللَّهُ وَرَسُولُهُۥٓ إِلَّا غُرُورٗا ١٢

12. Markey munaafiqiintu lahaayeen iyo kuwa quluubta ka buka Alle iyo Rasuulkiisu waxaan dhagar ahayn nooma yaboohin.

وَإِذۡ قَالَت طَّآئِفَةٞ مِّنۡهُمۡ يَٰٓأَهۡلَ يَثۡرِبَ لَا مُقَامَ لَكُمۡ فَٱرۡجِعُواْۚ وَيَسۡتَـٔۡذِنُ فَرِيقٞ مِّنۡهُمُ ٱلنَّبِيَّ يَقُولُونَ إِنَّ بُيُوتَنَا عَوۡرَةٞ وَمَا هِيَ بِعَوۡرَةٍۖ إِن يُرِيدُونَ إِلَّا فِرَارٗا ١٣

13. Markay qayb ka mid ah lahayd ree Madiinow meel aad ku nagaataan (goobta) dagaalka ma jirto, ee noqda (xagga Madiino), koox iyaga ka mid ahna waxay idan warsan Nabiga iyagoo dhihi guryihiibaa naga dayacnaa,

mana dayacna ee waxaan carar ahayn ma rabaan.

14. Haddii loogu soo galo magaalada dhan kasto, markaas la warsado gaalnimo way la imaan lahaayeen, waxaan wax yar ahaynse kuma dhex nagaadeen.

وَلَوْ دُخِلَتْ عَلَيْهِم مِّنْ أَقْطَارِهَا ثُمَّ سُئِلُوا۟ ٱلْفِتْنَةَ لَـَٔاتَوْهَا وَمَا تَلَبَّثُوا۟ بِهَآ إِلَّا يَسِيرًا ﴿١٤﴾

15. Horay waxay ugu ballantameen inayan cararin, ballanka Alle na waa lays warsan.

وَلَقَدْ كَانُوا۟ عَٰهَدُوا۟ ٱللَّهَ مِن قَبْلُ لَا يُوَلُّونَ ٱلْأَدْبَٰرَ ۚ وَكَانَ عَهْدُ ٱللَّهِ مَسْـُٔولًا ﴿١٥﴾

16. Waxaad dhahdaa carar aad geeri ka carartaan ama dil wax idiinma taro, wax yar waxaan ahaynna laydiin ku raaxeyn maayo (adduunka).

قُل لَّن يَنفَعَكُمُ ٱلْفِرَارُ إِن فَرَرْتُم مِّنَ ٱلْمَوْتِ أَوِ ٱلْقَتْلِ وَإِذًا لَّا تُمَتَّعُونَ إِلَّا قَلِيلًا ﴿١٦﴾

17. Dheh yaa idinka ilaalin Alle hadduu dhib idin la doono, ama naxariis, wax Alle ka soo hadhay oo sokeeye ama gargaare ahna heli meysaan.

قُلْ مَن ذَا ٱلَّذِى يَعْصِمُكُم مِّنَ ٱللَّهِ إِنْ أَرَادَ بِكُمْ سُوٓءًا أَوْ أَرَادَ بِكُمْ رَحْمَةً ۚ وَلَا يَجِدُونَ لَهُم مِّن دُونِ ٱللَّهِ وَلِيًّا وَلَا نَصِيرًا ﴿١٧﴾

Sida dhabta ahna waa la imtixaanay mu'miniinta, kuwii niyadda ka bukayna waxay muujiyeen munaafaqnimo, waxaana ka soo baxay oy ku hadleen in Alle iyo Rasuulkiisu ku ballanfureen, waxayna ka codsadeen saaxiibbadood inay goobta dagaalka iskaga baxaan kuna noqdaan magaalada Madiino oo muslimiintu daafacayeen, qaar ka mid ahna Nabigay fasax warsadeen iyagoo sheegi in guryuhu ka dayacan yihiin, dhab ahaanna waxay dooni carar, haddii loo soo galo oo gaalooba la dhahana way oggolaan, maxayse nolol adduun taraysaa, yaase Alle ka celin ciddii burisa ballankiisa, carar miyaase wax tari, ciddeese Alle ka sokow khayr iyo dhib karta, yaase gargaare ah Alle mooyee. **[Al-Axzaab: 11-17].**

18. Dhab ahaan yaa Alle u ogyahay kuwa reebayaalka ah (ku cabsiinta dagaalka) oo idinka mid ah iyo kuwa ku dhaha

* قَدْ يَعْلَمُ ٱللَّهُ ٱلْمُعَوِّقِينَ مِنكُمْ وَٱلْقَآئِلِينَ لِإِخْوَٰنِهِمْ هَلُمَّ إِلَيْنَا ۖ وَلَا يَأْتُونَ ٱلْبَأْسَ إِلَّا قَلِيلًا ﴿١٨﴾

walaalahooda (munaafiqiinta ah) noo imaadda, dagaalkana ma tagaan wax yar mooyee.

أَشِحَّةً عَلَيْكُمْ ۖ فَإِذَا جَآءَ ٱلْخَوْفُ رَأَيْتَهُمْ يَنظُرُونَ إِلَيْكَ تَدُورُ أَعْيُنُهُمْ كَٱلَّذِى يُغْشَىٰ عَلَيْهِ مِنَ ٱلْمَوْتِ ۖ فَإِذَا ذَهَبَ ٱلْخَوْفُ سَلَقُوكُم بِأَلْسِنَةٍ حِدَادٍ أَشِحَّةً عَلَى ٱلْخَيْرِ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ لَمْ يُؤْمِنُوا۟ فَأَحْبَطَ ٱللَّهُ أَعْمَٰلَهُمْ ۚ وَكَانَ ذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ يَسِيرًا ﴿١٩﴾

19. Way idinkala bakhayli (wanaagga) marka cabsi timaadna waxaad arki iyagoo ku soo eegi, indhahooduna wareegi sida mid geeri hayso, marka cabsidu tagtana waxay idiinkugu dhibaan carrabbo afbadan, isagoo idinkala bakhayli khayrka, kuwaasi ma rumeynin (xaqa) waana hoobiyey Alle camalkooda, arrintaasuna waa u fudduddahay Alle.

يَحْسَبُونَ ٱلْأَحْزَابَ لَمْ يَذْهَبُوا۟ ۖ وَإِن يَأْتِ ٱلْأَحْزَابُ يَوَدُّوا۟ لَوْ أَنَّهُم بَادُونَ فِى ٱلْأَعْرَابِ يَسْـَٔلُونَ عَنْ أَنۢبَآئِكُمْ ۖ وَلَوْ كَانُوا۟ فِيكُم مَّا قَٰتَلُوٓا۟ إِلَّا قَلِيلًا ﴿٢٠﴾

20. Waxay malayn inayan tagayn xisbiyadu (colalka) waxayna jecel yihiin in marka cololku yimaadaan ay baadiyaha jiraan oy warkiinna warsadaan, hadday idin la joogaanna ma dagaallameen wax yar mooye.

Jahaadka iyo difaaca dalka islaamka waa jid adag, mana aha in dadka la reebo oo cabsi galin iyo waswaas iyo balaayo iyo baasbaa dhacay lagula dhex jiro muslimiinta, sidii munaafiqiintii khayrka la necbayd mu'miniinta ee fulayaasha ahaa, indhaha galka ka rogi jiray sida ruux sakaraad hayo. Marka nabadda ahna xan iyo dhib u la jooga mu'miniinta, jeclaana in marka magaalada madiino iyo dhulka islaamka la soo weerari ay baadiyo ku maqnaadaan, waydiiyaanna warka muslimiinta, hadday joogaanna wax ma tareen. **[Al-Axzaab: 18-20].**

لَّقَدْ كَانَ لَكُمْ فِى رَسُولِ ٱللَّهِ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ لِّمَن كَانَ يَرْجُوا۟ ٱللَّهَ وَٱلْيَوْمَ ٱلْءَاخِرَ وَذَكَرَ ٱللَّهَ كَثِيرًا ﴿٢١﴾

21. Waxaa idiinku sugan Rasuulka Alle ku dayasho wanaagsan, ruuxii rajayn Alle iyo maalinta aakhiro, Alle na xusa in badan.

وَلَمَّا رَءَا ٱلْمُؤْمِنُونَ ٱلْأَحْزَابَ قَالُوا۟
هَٰذَا مَا وَعَدَنَا ٱللَّهُ وَرَسُولُهُۥ وَصَدَقَ
ٱللَّهُ وَرَسُولُهُۥ ۖ وَمَا زَادَهُمْ إِلَّآ إِيمَٰنًا
وَتَسْلِيمًا ﴿٢٢﴾

22. Markay mu'miniintu arkeen xisbiyadii (colkii) waxay dhaheen kan waa wixii Alle iyo Rasuulkiisu noogu yabooheen, run buu sheegay Alle iyo Rasuulkiisu, waxaan iimaan iyo hoggaansan ahaynna uma siyaadinnin.

مِّنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ رِجَالٌ صَدَقُوا۟ مَا
عَٰهَدُوا۟ ٱللَّهَ عَلَيْهِ ۖ فَمِنْهُم مَّن قَضَىٰ
نَحْبَهُۥ وَمِنْهُم مَّن يَنتَظِرُ ۖ وَمَا بَدَّلُوا۟
تَبْدِيلًا ﴿٢٣﴾

23. Mu'mininta waxaa ka mid ah rag ka rumeeyey waxay Alle kula ballantameen, waxaana ka mid ah mid gutay ballankii (ajashiisii), waxaana ka mid ah mid sugi, mana ayna badalin baddalid.

لِّيَجْزِىَ ٱللَّهُ ٱلصَّٰدِقِينَ بِصِدْقِهِمْ
وَيُعَذِّبَ ٱلْمُنَٰفِقِينَ إِن شَآءَ أَوْ يَتُوبَ
عَلَيْهِمْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿٢٤﴾

24. In Alle ka abaalmariyo runlowyaasha runtooda, oo cadaabana munaafiqiinta, hadduu doono, ama ka toobad aqbalo, Alle na waa dambidhaaf badane naxariista.

Waxaa ku waajib ah ruuxa mu'minka ah inuu ku daydo Rasuulka Alle: hadalka, ficilka, akhlaaqda iyo wax kasta oo wanaag ah, sida samirka, adkeysiga jahaadka iyo wixii la mid ah, waxayna calaamo u tahay Alle ka yaabid iyo darbasho maalinta qiyaame, ruuxa mu'minka dhabta ahna waa inuu rumeeyaa yabooha Alle iyo Rasuulkiisa, sida caadada mu'miniinta waa inay oofiyaan ballan qaadka Alle xaataa in xaqa difaaciisa lagu dhinto, siday faleen asaxaabtii Nabiga (ammaan iyo nabdgalyo Alle korkiisa ha yeelee) si Alle ruux walba u abaal mariyo. **[Al-Axzaab: 21-24].**

وَرَدَّ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ بِغَيْظِهِمْ لَمْ
يَنَالُوا۟ خَيْرًا ۚ وَكَفَى ٱللَّهُ ٱلْمُؤْمِنِينَ ٱلْقِتَالَ ۚ
وَكَانَ ٱللَّهُ قَوِيًّا عَزِيزًا ﴿٢٥﴾

25. Alle wuxuu ku celiyey kuwii gaaloobay cadhadoodii, wax khayr ahna mayna gaadhin, Alle ayaana ka kaafiyey mu'miniinta dagaal, Alle na waa xoogbadane adkaada.

وَأَنزَلَ ٱلَّذِينَ ظَٰهَرُوهُم مِّنْ أَهْلِ ٱلْكِتَٰبِ مِن صَيَاصِيهِمْ وَقَذَفَ فِى قُلُوبِهِمُ ٱلرُّعْبَ فَرِيقًا تَقْتُلُونَ وَتَأْسِرُونَ فَرِيقًا ﴿٢٦﴾

26. Kuwii u kaalmeeyey ehlu kitaabkana ahaa wuxuu ka soo dajiyey (ka soo saaray) dhufaysyadoodii, wuxuuna ku tuuray quluubtooda argagax, koox ka mid ah waad dilaysaan, kooxna waa qafaalanaysaan.

وَأَوْرَثَكُمْ أَرْضَهُمْ وَدِيَٰرَهُمْ وَأَمْوَٰلَهُمْ وَأَرْضًا لَّمْ تَطَـُٔوهَا ۚ وَكَانَ ٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرًا ﴿٢٧﴾

27. Wuxuuna idin dhaxalsiiyey dhulkoodii guryahoodii iyo xoolahoodii, iyo dhul aydaan hadda ka hor ku joogsan, Alle na wax kasta wuu karaa.

Alle wuxuu ka warramay in cadawgii isu soo bahaystay baabi'inta Rasuulka iyo mu'miniinta, magaalada Madiinana hareereeyey ay hungoobeen, lana noqdeen cadhadii iyagoon wax gaysan, mu'miniintiina Alle ka kaafiyey dagaal, iyo inuu yuhuuddii ku ballan furtay Nabiga iyo asxaabtiisana laga saaray dhufaysyadoodii; wax la laayay iyo wax la qafaashayna laga dhigay, dhulkay dulmiga la joogeenna loo soo celiyey mu'miniinta, ballan jabinta iyo khiyaamadana waa shaqada yuhuudda, waxaana yuhuud xukun caadil ah ku xukumay sacad binu mucaad. **[Al-Axzaab: 25-27].**

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِىُّ قُل لِّأَزْوَٰجِكَ إِن كُنتُنَّ تُرِدْنَ ٱلْحَيَوٰةَ ٱلدُّنْيَا وَزِينَتَهَا فَتَعَالَيْنَ أُمَتِّعْكُنَّ وَأُسَرِّحْكُنَّ سَرَاحًا جَمِيلًا ﴿٢٨﴾

28. Nabiyow ku dheh haweenkaaga haddaad tihiin kuwo dooni nolosha adduunyo iyo quruxdeeda kaalaya waan idin gacan marin si quruxsanna idiin sii deyne.

وَإِن كُنتُنَّ تُرِدْنَ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ وَٱلدَّارَ ٱلْـَٔاخِرَةَ فَإِنَّ ٱللَّهَ أَعَدَّ لِلْمُحْسِنَٰتِ مِنكُنَّ أَجْرًا عَظِيمًا ﴿٢٩﴾

29. Haddaadse tihiin kuwo dooni Alle iyo Rasuulkiisa iyo daartii aakhiro Alle wuxuu u darbay haweenka wanaagga fala oo idinka mid ah ajir wayn.

يَٰنِسَآءَ ٱلنَّبِىِّ مَن يَأْتِ مِنكُنَّ بِفَٰحِشَةٍ مُّبَيِّنَةٍ يُضَٰعَفْ لَهَا ٱلْعَذَابُ ضِعْفَيْنِ ۚ وَكَانَ ذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ يَسِيرًا ﴿٣٠﴾

30. Haweenka Nabigow tiinnii la timaadda xumaan cad waxaa loo laa laabi cadaabka, arrintaasna waa u fududdahay Alle.

31. Tiise adeecda Alle iyo Rasuulkiisa oo camal fiican fasha waxaan siinaynaa labo ajir, waxaanna u diyaarinnay rizqi wanaagsan.

* وَمَن يَقْنُتْ مِنكُنَّ لِلَّهِ وَرَسُولِهِۦ وَتَعْمَلْ صَٰلِحًا نُّؤْتِهَآ أَجْرَهَا مَرَّتَيْنِ وَأَعْتَدْنَا لَهَا رِزْقًا كَرِيمًا ﴿٣١﴾

Aayadahan waxay waanin haweenkii Nabiga illeen waa banii aadmiye, wuxuuna Alle kala door galiyey inay dhalanteedka adduunka iyo quruxdiisa iyo Alle iyo Rasuulkiisa iyo daar aakhiro kala doortaan, oo hadday adduunyo rabaan uu Nabigu si quruxsan u sii dayn, hadday wanaag falaanna Alle si fiican ku abaalmarin, tii iyaga ka mid ah oo xumaan cad la timaadana (Alle waa ka koriyey) si daran loo ciqaabi, tiise Alle iyo Rasuulkiisa adeecda camal fiicanna fasha Alle siin ajir badan iyo khayr. **[Al-Axzaab: 28-31].**

32. Haweenka Nabigow ma tihidiin sida haweenka kale, haddaadse dhowrsataan hadalka ha nuglaynina oo uu damco midka qalbiga ka buka, hadal wanaagsanna ku hadla.

يَٰنِسَآءَ ٱلنَّبِيِّ لَسْتُنَّ كَأَحَدٍ مِّنَ ٱلنِّسَآءِ إِنِ ٱتَّقَيْتُنَّ فَلَا تَخْضَعْنَ بِٱلْقَوْلِ فَيَطْمَعَ ٱلَّذِى فِى قَلْبِهِۦ مَرَضٌ وَقُلْنَ قَوْلًا مَّعْرُوفًا ﴿٣٢﴾

33. Kuna sugnaada guryihiinna, hana u wareegaysannina (idinkoo is faydi) sidii jaahiliyadii horraysay, salaaddana ooga, sakadana bixiya, Alle iyo Rasuulkiisana adeeca, Alle wuxuu uun dooni inuu xumaanta idinka tagsiiyo (fogeeyo dambiga) eehelu baytkow, idinna daahir yeelo.

وَقَرْنَ فِى بُيُوتِكُنَّ وَلَا تَبَرَّجْنَ تَبَرُّجَ ٱلْجَٰهِلِيَّةِ ٱلْأُولَىٰ ۖ وَأَقِمْنَ ٱلصَّلَوٰةَ وَءَاتِينَ ٱلزَّكَوٰةَ وَأَطِعْنَ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥٓ ۚ إِنَّمَا يُرِيدُ ٱللَّهُ لِيُذْهِبَ عَنكُمُ ٱلرِّجْسَ أَهْلَ ٱلْبَيْتِ وَيُطَهِّرَكُمْ تَطْهِيرًا ﴿٣٣﴾

34. Xusuustana waxa lagu aqrin guryihiinna oo aayaadka Alle ah iyo sunnada (Nabiga), Alle na waa wax walba oge xeeldheer.

وَٱذْكُرْنَ مَا يُتْلَىٰ فِى بُيُوتِكُنَّ مِنْ ءَايَٰتِ ٱللَّهِ وَٱلْحِكْمَةِ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ لَطِيفًا خَبِيرًا ﴿٣٤﴾

إِنَّ ٱلْمُسْلِمِينَ وَٱلْمُسْلِمَٰتِ وَٱلْمُؤْمِنِينَ
وَٱلْمُؤْمِنَٰتِ وَٱلْقَٰنِتِينَ وَٱلْقَٰنِتَٰتِ
وَٱلصَّٰدِقِينَ وَٱلصَّٰدِقَٰتِ وَٱلصَّٰبِرِينَ
وَٱلصَّٰبِرَٰتِ وَٱلْخَٰشِعِينَ وَٱلْخَٰشِعَٰتِ
وَٱلْمُتَصَدِّقِينَ وَٱلْمُتَصَدِّقَٰتِ وَٱلصَّٰٓئِمِينَ
وَٱلصَّٰٓئِمَٰتِ وَٱلْحَٰفِظِينَ فُرُوجَهُمْ
وَٱلْحَٰفِظَٰتِ وَٱلذَّٰكِرِينَ ٱللَّهَ كَثِيرًا
وَٱلذَّٰكِرَٰتِ أَعَدَّ ٱللَّهُ لَهُم مَّغْفِرَةً وَأَجْرًا
عَظِيمًا ﴿٣٥﴾

35. Ragga muslimiinta ah iyo haweenka muslimaadka ah, ragga mu'miniinta ah iyo haweenka mu'minaadka ah, ragga Alle adeeca iyo haweenka adeeca, ragga runlowga ah iyo haweenka runloowga ah, ragga samra iyo haweenka samra, ragga u khushuuca Alle iyo haweenka u khushuuca, ragga sadaqaysta iyo haweenka sadaqaysta, ragga sooma iyo haweenka sooma, ragga isdhawra iyo haweenka isdhawra, iyo ragga in badan Alle xusa iyo haweenka in badan xusa, wuxuu Alle u darbay dambi dhaaf iyo ajir weyn.

Aayadahan waxay si gaar ah u guubaabin una hanuunin haweenkii Nabiga ee joogay guriga daahirka ah si haweenka kale ee muslimiinta ah ugu daydaan, waxaana loo sheegay inayan la mid ahayn haweenka kale, kana fogaadaan wareeg iyo hadal nugul oo kuwa jirran waxgaliya ee ay hadal wanaagsan ku hadlaan, ayna is asturaan ooyan noqon sidii jaahiliyadii hore. Nasiib darro waxaa dhacday jaahiliyad cusub oo qaawisay haweenkii kana dhigtay badeeco la gado, jidhkooda ka ganacsada, taasina waxay khatar ku tahay nolasha bini aadmiga, salaad, sako, Alle iyo rasuulkiisa adeecidna laga helo si Alle xumaanta uga dheereeyo iyagoo xusuusan nicmada Alle iyo Nabinnimada guryahooda ku sugan iyo quraanka lagu akhrin, Alle na wuxuu ku abaal marin ajir wayn muslimiinta, mu'miniinta dhawrsadayaasha ah, rumeeyayaasha, samirrowyaasha, kuwa khushuuca, kuwa sadaqaysta, kuwa sooma kuwa isdhawra iyo kuwa badiya xuska Alle. **[Al-Axzaab: 32-35].**

وَمَا كَانَ لِمُؤْمِنٍ وَلَا مُؤْمِنَةٍ إِذَا قَضَى
ٱللَّهُ وَرَسُولُهُۥٓ أَمْرًا أَن يَكُونَ لَهُمُ
ٱلْخِيَرَةُ مِنْ أَمْرِهِمْ ۗ وَمَن يَعْصِ ٱللَّهَ
وَرَسُولَهُۥ فَقَدْ ضَلَّ ضَلَٰلًا مُّبِينًا ﴿٣٦﴾

36. Kuma habboona (umana bannaana) nin mu'min ah iyo haweenay mu'minad ah marka Alle iyo Rasuulkiisu wax xukumaan inay khiyaar u yeeshaan amarkooda, ruuxiise

caasiya Alle iyo rasuulkiisa wuxuu dhumay dhumid cad.

37. (Xusuuso) markaad ku lahayd kii Alle u nicmeeyey, adna aad u nicmaysay (Zayd binu Xaarithah) hayso haweenaydaada Alle na ka yaab, naftaadana aad ku qarinaysay wax Alle muujin ood kana cabsanaysid dadka (xishoonaysid) Alle ayaana u muta in laga cabsado (lagana xishoodo), markuu Zayd dantiisii ka dhammaystayna (isfureenna) aan kuu guurinnay si ayan wax dhib ah u ahaannin mu'miniinta korkooda (hadday guursadaan) haweenka ay fureen kuway wiilal ka dhigteen (iyagoon dhalin) amarka Alle na waa kii la fuliyo.

وَإِذْ تَقُولُ لِلَّذِىٓ أَنْعَمَ ٱللَّهُ عَلَيْهِ
وَأَنْعَمْتَ عَلَيْهِ أَمْسِكْ عَلَيْكَ زَوْجَكَ
وَٱتَّقِ ٱللَّهَ وَتُخْفِى فِى نَفْسِكَ مَا ٱللَّهُ
مُبْدِيهِ وَتَخْشَى ٱلنَّاسَ وَٱللَّهُ أَحَقُّ
أَن تَخْشَىٰهُ ۖ فَلَمَّا قَضَىٰ زَيْدٌ مِّنْهَا
وَطَرًا زَوَّجْنَـٰكَهَا لِكَىْ لَا يَكُونَ عَلَى
ٱلْمُؤْمِنِينَ حَرَجٌ فِىٓ أَزْوَٰجِ أَدْعِيَآئِهِمْ
إِذَا قَضَوْا۟ مِنْهُنَّ وَطَرًا ۚ وَكَانَ أَمْرُ ٱللَّهِ
مَفْعُولًا ﴿٣٧﴾

Aayadda hore waxay caddayn inaan ruuxna u bannaanayn inuu khilaafo waxa Alle iyo Rasuulkiisu fareen oo xukun ah wax khiyaar iyo door doorasha ahna ayan xaq u lahayn, ruuxii amarka Alle iyo Rasuulkiisa caasiya oo khilaafana waa ruux dhumay oo jidka xaqa ah ka leexday, aayadaha kale waxay ka qisoon in asaxaabi la dhihi jiray Zayd oo Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ka wiil yeeshay waqti hore uu guursaday haweenay la dhihi jiray saynab, isna neceen muddo ka dib, markaas uu Nabiga kala tashaday, Nabiguna faray inuu haysto xaaskiisa Alle na ka yaabo, hase yeeshee Alle ayaa Nabiga ku yar canaantay; maxaa yeelay Alle ayaa Nabiga tusiyey inuu guursan markay is furaan, si uu caadadii jaahiliyadda u buriyo, aayaddana kuma sugno wax warka lagu badiyo, Alle na wuxuu doono yuu xukumaa oo falaa, waxaana waajib ah inaan rumeyno. Caa'isha waxaa laga wariyey (Alle ha ka raalli noqdee) inay tidhi: hadduu Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wax loo waxyooday qarin wuxuu qarin lahaa aayaddan. **[Al-Axzaab: 36-37].**

38. Nabiga korkiisa dhib ma aha waxa Alle u banneeyey, waana jidkii Alle ee dadkii tagay ee

مَّا كَانَ عَلَى ٱلنَّبِىِّ مِنْ حَرَجٍ فِيمَا
فَرَضَ ٱللَّهُ لَهُۥ ۖ سُنَّةَ ٱللَّهِ فِى ٱلَّذِينَ

hore, amarka Allena waa qadar xukuman.

خَلَوْا۟ مِن قَبْلُ ۚ وَكَانَ أَمْرُ ٱللَّهِ قَدَرًا مَّقْدُورًا ﴿٣٨﴾

39. (Waxaa ammaan mudan) kuwa gaadhsiiya (dadka) farriimaha Alle, kana cabsada Alle, oon kana cabsan axad ka soo hadhay, Alle ayaana ku filan xisaabiye (kaalmayn).

ٱلَّذِينَ يُبَلِّغُونَ رِسَٰلَٰتِ ٱللَّهِ وَيَخْشَوْنَهُۥ وَلَا يَخْشَوْنَ أَحَدًا إِلَّا ٱللَّهَ ۗ وَكَفَىٰ بِٱللَّهِ حَسِيبًا ﴿٣٩﴾

40. Ma aha (Nabiga) Muxamad ah aabbaha ruux raggiinna ka mid ah, laakiin waa Rasuulkii Alle iyo kii lagu khatimey Nabiyada, Alle na wax walba waa ogyahay.

مَّا كَانَ مُحَمَّدٌ أَبَآ أَحَدٍ مِّن رِّجَالِكُمْ وَلَٰكِن رَّسُولَ ٱللَّهِ وَخَاتَمَ ٱلنَّبِيِّـۧنَ ۗ وَكَانَ ٱللَّهُ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمًا ﴿٤٠﴾

41. Kuwa xaqa rumeeyow xusa Alle wax badan.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ٱذْكُرُوا۟ ٱللَّهَ ذِكْرًا كَثِيرًا ﴿٤١﴾

42. Weyneeyana aroortii iyo galabtii.

وَسَبِّحُوهُ بُكْرَةً وَأَصِيلًا ﴿٤٢﴾

43. Alle na waa kan idiin naxariista malaa'igtiisuna idiin ducayso, si uu idiin ka bixiyo mugdiyaasha idiin kuna bixiyo nuurka, waana kan u naxariista mu'miniinta.

هُوَ ٱلَّذِى يُصَلِّى عَلَيْكُمْ وَمَلَٰٓئِكَتُهُۥ لِيُخْرِجَكُم مِّنَ ٱلظُّلُمَٰتِ إِلَى ٱلنُّورِ ۚ وَكَانَ بِٱلْمُؤْمِنِينَ رَحِيمًا ﴿٤٣﴾

44. Bariidadoodu maalintay Alle la kulmi waa salaan, wuxuuna u darbay ajir weyn.

تَحِيَّتُهُمْ يَوْمَ يَلْقَوْنَهُۥ سَلَٰمٌ ۚ وَأَعَدَّ لَهُمْ أَجْرًا كَرِيمًا ﴿٤٤﴾

Wax Alle xalaaleeyey Nabiga wax kama saarra, illeen amarka isagaa iska leh, hor iyo dibbee, waxaana ammaan mudan kuwa farriinta xaqa ah ee Alle gaadhsiiya dadka, kana yaaba Alle kaliya, wax ka soo hadhayna aan ka cabsanayn, Alle na ku filan wakiil gargaar ah oo xisaabiya, tan kale waxay sheegi aayadda afartanaad inuusan Nabigu aabbo u ahayn ragga ee uu yahay Rasuulkii Alle ee lagu khatimay Nabiyada, Alle na wax walba waa daalacdaa, waase in xuska Alle la badiyaa wakhti kasta, si Alle noogu naxariisto, malaa'igtuna noogu ducayso, nuurna u hello mugdigana uga baxno, maalintaan la kulannana uu inoo naxariisto nabad galyo iyo ajir waynna inoo siiyo. **[Al-Axzaab: 38-44].**

45. Nabiyow waxaannu ku dirray adoo marag ah, oo bishaarayn oo digi.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِيُّ إِنَّآ أَرۡسَلۡنَـٰكَ شَـٰهِدًا وَمُبَشِّرًا وَنَذِيرًا ﴿٤٥﴾

46. Oo dadka Alle ugu yeedhi idankiisa, oo siraad ifi ah.

وَدَاعِيًا إِلَى ٱللَّهِ بِإِذۡنِهِۦ وَسِرَاجًا مُّنِيرًا ﴿٤٦﴾

47. Ee u bishaaree mu'miniinta inay xagga Alle ku leeyihiin fadli (dheeraad) weyn.

وَبَشِّرِ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ بِأَنَّ لَهُم مِّنَ ٱللَّهِ فَضۡلًا كَبِيرًا ﴿٤٧﴾

48. Hana adeecin gaalada iyo munaafiqiinta, dhibkooda iska gudub (hana u aabayeelin) Alle na talo saaro isagaa ku filan wakiile.

وَلَا تُطِعِ ٱلۡكَـٰفِرِينَ وَٱلۡمُنَـٰفِقِينَ وَدَعۡ أَذَىٰهُمۡ وَتَوَكَّلۡ عَلَى ٱللَّهِۚ وَكَفَىٰ بِٱللَّهِ وَكِيلًا ﴿٤٨﴾

Alleheen wuxuu u diray dadka dhammaantiis Nabiga Muxamed ah (ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) isagoo marag ah oo u bishaarayn mu'miniinta una digi gaalada, xaqana dadka ugu yeedhi, isagoo nuur cad oon mugdi ku jirin ah, Alle na wuxuu faray inuu u sheego mu'miniinta wanaagga Alle u darbay iyo inuusan gaalada iyo munaafiqiinta warkooda adeecin, isagana jeedsado, Alle na talo saarto, illeen isagaa ku filan talo saarashee. Cadaa binu Yasaar waxaa laga wariyey inuu yidhi: waxaan la kulmay Cabdullaahi binu Camar binu Caas, waxaana idhi: iiga warran tilmaanta Nabiga (ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) tawreed dhexdeeda, wuxuuna yidhi: Alle Ayaan ku dhaartaye wuxuu ku tilmaaman yahay tawreed tilmaamihiisa quraanka qaarkood. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: markay soo dagtay aayadda (Nabiyoow annagaa ku dirray adoo marag ah...) oo uu ahaa Nabiguna kii faray Cali iyo Macaad (Alle ha ka raallinoqdee) inay aadaan Yaman yaa wuxuu ku yidhi (ammaan iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): taga bishaareeyana, hana eryina, fududeeyana hana adkyenina, waxaa laygu soo dajiyay (aayaddane). Waxaa wariyey Ibnu Abiixaatim iyo Dabaraani. **[Al-Axzaab: 45-48].**

49. Kuwa (xaqa) rumeeyow haddaad guursataan haween mu'minaad ah markaas aad furtaan taabasho horteed, wax cidda ah kuma lihidin korkooda oy tirsan, ee gacan mariya una sii daaya si quruxsan.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِذَا نَكَحۡتُمُ ٱلۡمُؤۡمِنَـٰتِ ثُمَّ طَلَّقۡتُمُوهُنَّ مِن قَبۡلِ أَن تَمَسُّوهُنَّ فَمَا لَكُمۡ عَلَيۡهِنَّ مِنۡ عِدَّةٖ تَعۡتَدُّونَهَاۖ فَمَتِّعُوهُنَّ وَسَرِّحُوهُنَّ سَرَاحٗا جَمِيلًا ﴿٤٩﴾

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِيُّ إِنَّآ أَحۡلَلۡنَا لَكَ أَزۡوَٰجَكَ
ٱلَّٰتِيٓ ءَاتَيۡتَ أُجُورَهُنَّ وَمَا مَلَكَتۡ
يَمِينُكَ مِمَّآ أَفَآءَ ٱللَّهُ عَلَيۡكَ وَبَنَٰتِ
عَمِّكَ وَبَنَاتِ عَمَّٰتِكَ وَبَنَاتِ خَالِكَ
وَبَنَاتِ خَٰلَٰتِكَ ٱلَّٰتِي هَاجَرۡنَ مَعَكَ
وَٱمۡرَأَةً مُّؤۡمِنَةً إِن وَهَبَتۡ نَفۡسَهَا لِلنَّبِيِّ
إِنۡ أَرَادَ ٱلنَّبِيُّ أَن يَسۡتَنكِحَهَا خَالِصَةً
لَّكَ مِن دُونِ ٱلۡمُؤۡمِنِينَۖ قَدۡ عَلِمۡنَا مَا
فَرَضۡنَا عَلَيۡهِمۡ فِيٓ أَزۡوَٰجِهِمۡ وَمَا مَلَكَتۡ
أَيۡمَٰنُهُمۡ لِكَيۡلَا يَكُونَ عَلَيۡكَ حَرَجٞۗ
وَكَانَ ٱللَّهُ غَفُورٗا رَّحِيمٗا ٥٠

50. Nabiyow waxaan kuu bannaynay haweenkaaga aad siisay meherkoodii iyo waxaad hanatay (xagga gaalada) oo Alle kugu soo celiyey, iyo gabdhaha adeerkaa, gabdhaha eeddadaa, gabdhaha abtiyadaa, gabdhaha habar yarahaa oo kula soo hijrooday, iyo haweenay mu'minad ah hadday nafteeda Nabiga u hibayso, hadduu doono inuu guursado Nabigu, iyadoo ay gaar kugu tahay mu'miniinta ka sokow, waan ognahay waxaan ku faral yeellay mu'miniinta xagga haweenkooda, iyo waxa gacantoodu hanato, si aan korkaaga dhib u ahaan, Alle na waa dambi dhaafe naxariista.

Aayadahan waxay ka warrami xagga guurka, iyo furidda iyo inaan haweenay la furay taabasho horteed wax cidda ah korkeeda ahayn, tan kale waxay caddayn waxyaalaha guurka ku saabsan oo Alle u banneeyey Nabiga (ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) iyo mu'mininiintaba, wax Nabiga ku gaar ah iyo wax guud ahaaneedba, iyo in meherku yahay lagama maarmaan, siduu Nabigu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee): dayday kaatun bir ahna ha ahaatee (meher), kuwana wuxuu isugu guuriyey inuu quraanka baro, taasina waa xurmeynta haweenka iyo qaddarintooda. **[Al-Axzaab: 49-50].**

* تُرۡجِي مَن تَشَآءُ مِنۡهُنَّ وَتُـٔۡوِيٓ
إِلَيۡكَ مَن تَشَآءُۖ وَمَنِ ٱبۡتَغَيۡتَ مِمَّنۡ
عَزَلۡتَ فَلَا جُنَاحَ عَلَيۡكَۚ ذَٰلِكَ أَدۡنَىٰٓ
أَن تَقَرَّ أَعۡيُنُهُنَّ وَلَا يَحۡزَنَّ وَيَرۡضَيۡنَ
بِمَآ ءَاتَيۡتَهُنَّ كُلُّهُنَّۚ وَٱللَّهُ يَعۡلَمُ مَا فِي
قُلُوبِكُمۡۚ وَكَانَ ٱللَّهُ عَلِيمًا حَلِيمٗا ٥١

51. Waad dib dhigi taad doonto, waadna soo dhaweyn taad doonto oo ka mid ah, kuwaad doonto inaad soo ceshato oo ka mid ah kuwaad ka fogaatay dhib korkaaga ma aha inaad soo ceshato. Saasaana u dhaw inay indhadoodu qabowsadaan ooyan murugoon oy raalli ku noqdaan waxaad siisay dhammaantood,

Alle na waa ogyahay waxa quluubtiinna ku sugan, Alle na waa oge dulqaad leh.

52. Kuuma bannaana Nabiyow haweenka (kale) mar dambe iyo inaad haween kale ku badasho si kasta ood ula yaabto quruxdooda waxaad hanato mooyee (oo gaalo laga helo) Alle na wax walba waa ilaaliye.

لَّا يَحِلُّ لَكَ ٱلنِّسَآءُ مِنۢ بَعۡدُ وَلَآ أَن تَبَدَّلَ بِهِنَّ مِنۡ أَزۡوَٰجٍ وَلَوۡ أَعۡجَبَكَ حُسۡنُهُنَّ إِلَّا مَا مَلَكَتۡ يَمِينُكَۗ وَكَانَ ٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَيۡءٖ رَّقِيبًا ٥٢

Aayadahan waxay ka warrami Nabiga (ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) iyo haweenkiisii, iyo inay Nabiga u bannaanayd inuu siduu rabo ula noolaado haweenkiisa, si iyaguna ayna u murgin, una raalli noqdaan, Alle na wuu daalacan waxa quluubta ku sugan. Wuxuuna Alle ku abaalmariyey haweenkii Nabiga inayna Nabiga u bannaanayn guur haween kale, iyo inuu furo haweenkiisa oo kuwo kale ku baddalo, maxaa yeelay imtixaan bay soo mareen kana gudbeen waxayna noqdeen hooyooyinkii mu'miniinta, saasna waxaa qaba Ibnu Cabbaas, Mujaahid, Daxaak, Qataade, Xasan, Ibnu Jariir iyo culimo kale oo badan. **[Al-Axzaab: 51-52].**

53. Kuwa (xaqa) rumeeyow ha galina guryaha Nabiga in cunno leydiinku idmo (yeedho) mooyee idinkoon sugayn bislaadkiisa, hasa yeeshee marka laydiin yeedho gala, markaad cuntaanna socda hana sugina sheeko, illeen taasi waxay dhibi Nabigee wuuna idinka xishoone Alle se xaqa kama xishoodo, haddaad wax warsataan haweenka (Nabigana) ka warsada xijaab gadaashiis. Saasaa u daahirnimo badan (u fiican) quluubtiinna iyo quluubtoodaba, xaqna uma lihidin inaad dhibtaan Rasuulka Alle ama aad guursataan

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تَدۡخُلُواْ بُيُوتَ ٱلنَّبِيِّ إِلَّآ أَن يُؤۡذَنَ لَكُمۡ إِلَىٰ طَعَامٍ غَيۡرَ نَٰظِرِينَ إِنَىٰهُ وَلَٰكِنۡ إِذَا دُعِيتُمۡ فَٱدۡخُلُواْ فَإِذَا طَعِمۡتُمۡ فَٱنتَشِرُواْ وَلَا مُسۡتَـٔۡنِسِينَ لِحَدِيثٍۚ إِنَّ ذَٰلِكُمۡ كَانَ يُؤۡذِي ٱلنَّبِيَّ فَيَسۡتَحۡيِۦ مِنكُمۡۖ وَٱللَّهُ لَا يَسۡتَحۡيِۦ مِنَ ٱلۡحَقِّۚ وَإِذَا سَأَلۡتُمُوهُنَّ مَتَٰعٗا فَسۡـَٔلُوهُنَّ مِن وَرَآءِ حِجَابٖۚ ذَٰلِكُمۡ أَطۡهَرُ لِقُلُوبِكُمۡ وَقُلُوبِهِنَّۚ وَمَا كَانَ لَكُمۡ أَن تُؤۡذُواْ رَسُولَ ٱللَّهِ وَلَآ أَن تَنكِحُوٓاْ أَزۡوَٰجَهُۥ مِنۢ بَعۡدِهِۦٓ أَبَدًاۚ إِنَّ ذَٰلِكُمۡ كَانَ عِندَ ٱللَّهِ عَظِيمًا ٥٣

haweenkiisa gadaashiis waligeed, arrintaasuna way ku wayn tahay Alle agtiisa.

54. Haddaad muujisaan wax ama qarisaan Alle waa wax kaste oge.

إِن تُبْدُواْ شَيْـًٔا أَوْ تُخْفُوهُ فَإِنَّ ٱللَّهَ كَانَ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمًا ﴿٥٤﴾

55. Korkooda (haweenka) dhib kama saarra (inaaney ka xijaaban) aabayaalkood, wiilashooda, walaalahood, wiilasha walaalahood, wiilasha abbaayayaalkood, haweenkooda (mu'miniinta ah) iyo waxay hanatay gacmahoodu, kana dhawrasada Alle, Alle wax kasta wuxuu u yahay marage.

لَّا جُنَاحَ عَلَيْهِنَّ فِىٓ ءَابَآئِهِنَّ وَلَآ أَبْنَآئِهِنَّ وَلَآ إِخْوَٰنِهِنَّ وَلَآ أَبْنَآءِ إِخْوَٰنِهِنَّ وَلَآ أَبْنَآءِ أَخَوَٰتِهِنَّ وَلَا نِسَآئِهِنَّ وَلَا مَا مَلَكَتْ أَيْمَٰنُهُنَّ ۚ وَٱتَّقِينَ ٱللَّهَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ شَهِيدًا ﴿٥٥﴾

Ma habboona in guriga Nabiga (ammaan iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) lays ka galo idan la'aan iyo isagoon cunto laysugu yeedhin, aadaabtuna waa in marka marti qaadku dhammaado loo fududeeyo dadka guriga een sheeko la wadin gaar ahaan waxaa lagu sii adkeeyey guryihii Nabiga ee waxyigu ku soo dagayay, Nabiguna uu ka xishoonayay bixinta, Alle se xaqa ka ma xishoodo, waxaana asluub fiican ah in marka haweenka la warsan alaab iyo wax la mid ah laga warsado meel asturan gadaasheed iyo xushmad sidii haweenkii Nabiga Alle ku caddeeyey, saasaana qalbiga u roon, mana bannaana in Rasuulka Alle la dhibo ama haweenkiisii la guursado gadaashiis, maxaa yeelay waa arrin ku wayn Alle agtiisa, Alle na wax kasta waa ogyahay, hasa yeeshee haweenka dhib kama saarra inaanay ka xijaaban ragga aan u bannaanayn inay guursadaan weligood sida aabbe, wiilkeeda, walaalkeed iyo wixii la mid ah sidoo kale haweenka mu'miniinta ah ee sharafta leh. Rasuulkuna (ammaan iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: haddii la iigu yeedho cudud waan ajiibi, haddii la ii hadiyeeyo mijinna waan aqbali, ee markaad faaruqdaan wixii laydiin ku yeedhay ka fududeeya qoyska guriga leh una kala taga dhulka. Wataas asluubta iyo sharafta islaamku. **[Al-Axzaab: 53-55].**

56. Alle iyo malaa'igtiisu waxay ku sallin (ammaani) Nabiga, ee kuwa (xaqa) rumeeyow ku salliya korkiisa oo salaama salaan.

إِنَّ ٱللَّهَ وَمَلَٰٓئِكَتَهُۥ يُصَلُّونَ عَلَى ٱلنَّبِىِّ ۚ يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ صَلُّواْ عَلَيْهِ وَسَلِّمُواْ تَسْلِيمًا ﴿٥٦﴾

إِنَّ ٱلَّذِينَ يُؤْذُونَ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ لَعَنَهُمُ ٱللَّهُ فِى ٱلدُّنْيَا وَٱلْـَٔاخِرَةِ وَأَعَدَّ لَهُمْ عَذَابًا مُّهِينًا ﴿٥٧﴾

57. Kuwa dhiba Alle iyo Rasuulkiisa wuu lacnaday Alle adduun iyo aakhiroba, wuxuuna u darbay cadaab wax dulleeya.

وَٱلَّذِينَ يُؤْذُونَ ٱلْمُؤْمِنِينَ وَٱلْمُؤْمِنَٰتِ بِغَيْرِ مَا ٱكْتَسَبُوا۟ فَقَدِ ٱحْتَمَلُوا۟ بُهْتَٰنًا وَإِثْمًا مُّبِينًا ﴿٥٨﴾

58. Kuwa ku dhiba mu'miniinta rag iyo haweenba waxayan kasbannin waxay xambaarteen been abuurasho iyo dambi cad.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِىُّ قُل لِّأَزْوَٰجِكَ وَبَنَاتِكَ وَنِسَآءِ ٱلْمُؤْمِنِينَ يُدْنِينَ عَلَيْهِنَّ مِن جَلَٰبِيبِهِنَّ ذَٰلِكَ أَدْنَىٰٓ أَن يُعْرَفْنَ فَلَا يُؤْذَيْنَ ۗ وَكَانَ ٱللَّهُ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿٥٩﴾

59. Nabiyow ku dheh haweenkaaga iyo gabdhahaada iyo haweenka mu'miniinta isku dada shukadiinna, taasaa idiinku dhaw in laydin aqoonsado oon laydin dhibine, Alle na waa dambi dhaafe naxariista ah.

* لَّئِن لَّمْ يَنتَهِ ٱلْمُنَٰفِقُونَ وَٱلَّذِينَ فِى قُلُوبِهِم مَّرَضٌ وَٱلْمُرْجِفُونَ فِى ٱلْمَدِينَةِ لَنُغْرِيَنَّكَ بِهِمْ ثُمَّ لَا يُجَاوِرُونَكَ فِيهَآ إِلَّا قَلِيلًا ﴿٦٠﴾

60. Haddayna ka joogin munaafiqiintu iyo kuwa qalbiga ka buka iyo kuwa gilgili (beenta ku faafin) Madiino waannu kugu diri kulamana darsayaan wax yar mooyee.

مَّلْعُونِينَ ۖ أَيْنَمَا ثُقِفُوٓا۟ أُخِذُوا۟ وَقُتِّلُوا۟ تَقْتِيلًا ﴿٦١﴾

61. Waana la lacnaday meelkastooy joogaanba, hana la qabto oo la dilo dilmo.

سُنَّةَ ٱللَّهِ فِى ٱلَّذِينَ خَلَوْا۟ مِن قَبْلُ ۖ وَلَن تَجِدَ لِسُنَّةِ ٱللَّهِ تَبْدِيلًا ﴿٦٢﴾

62. Waana sunnadii Alle ee dadkii horee tagay wax badalina uma heshid sunnada Alle.

Salliga Alle waa ammaan iyo naxariis, kan malaaigtuna waa duco iyo dambi dhaaf warsasho sida dadka, aayaddana wuxuu ku faray Alle dadka inay ku salliyaan Nabiga. Salaadda dhexdeeda, iyo markii la xuso, iyo khudbadahana waaba waajib salligu. Fadli badan baana ku soo arooray xaalkeeda oo ka mid yahay in Nabigu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): kan iigu mudan dadka maalinta qiyaame waa kan ugu badan salligayga. Aayadaha kalana waxay cadayn in kuwa Alle hadal xun ku dhiba iyo Rasuulkiisa xaqana

ka leexda, mu'miniintana dhiba dambi la'aan ay mudan lacanad adduun iyo mid aakhiraba, ay xambaarsadeen abuurasho iyo dambi. Haweenkii Nabiga iyo gabdhihiisii iyo haweenka mu'miniinta oo dhan waxaa la faray inay is asturaan, si loo aqoonsado inay sharaf leeyihiin oon loo dhibin. Mana habboona waana munaafiqnimo lacanad lagu muto iyo qabasho iyo dilba in lala dhex ordo magaalooyinka muslimka wax muslimka dhibi oo war been ahiyo dacaayad ah, wataas akhlaaqda islaamku iyo dhaqankiisa dhabta ah. **[Al-Axzaab: 56-62].**

يَسْـَٔلُكَ ٱلنَّاسُ عَنِ ٱلسَّاعَةِ ۖ قُلْ إِنَّمَا عِلْمُهَا عِندَ ٱللَّهِ ۚ وَمَا يُدْرِيكَ لَعَلَّ ٱلسَّاعَةَ تَكُونُ قَرِيبًا ﴿٦٣﴾

63. Dadku waxay ku warsan Nabiyow saacadda (qiyaame), waxaad dhahdaa cilmigeedu wuxuu jiraa Alle agtiis, miyaadse ogtahay inay suuroowdo inay saacaddu dhawdahay.

إِنَّ ٱللَّهَ لَعَنَ ٱلْكَـٰفِرِينَ وَأَعَدَّ لَهُمْ سَعِيرًا ﴿٦٤﴾

64. Alle wuxuu lacnaday gaalada wuxuuna u darbay (naarta) saciiro.

خَـٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدًا ۖ لَّا يَجِدُونَ وَلِيًّا وَلَا نَصِيرًا ﴿٦٥﴾

65. Iyagoo ku waari dhexdeeda waligood oon helaynna sokeeye jecel iyo gargaare midna.

يَوْمَ تُقَلَّبُ وُجُوهُهُمْ فِى ٱلنَّارِ يَقُولُونَ يَـٰلَيْتَنَآ أَطَعْنَا ٱللَّهَ وَأَطَعْنَا ٱلرَّسُولَا۠ ﴿٦٦﴾

66. Maalinta lagu gagaddin wajigooda naarta waxay dhihi shallaytadeennee haddaan adeecno Alle oon adeecno rasuulkii.

وَقَالُوا۟ رَبَّنَآ إِنَّآ أَطَعْنَا سَادَتَنَا وَكُبَرَآءَنَا فَأَضَلُّونَا ٱلسَّبِيلَا۠ ﴿٦٧﴾

67. Waxayna dhihi Allow waxaan adeecnay madaxdannadii iyo kuwii noo waaweynaa, waxayna naga dhumiyeen jidkii.

رَبَّنَآ ءَاتِهِمْ ضِعْفَيْنِ مِنَ ٱلْعَذَابِ وَٱلْعَنْهُمْ لَعْنًا كَبِيرًا ﴿٦٨﴾

68. Ee Allow sii kuwaas laban laab cadaab lacanad waynna lacnad.

Sida aayado badanba sheegeen saacadda qiyaame markey dhici Alle unbaa og, inay dhawdahayna waa suurowdaa, waana sugan tahay, illeen wixii kugu soo socdaba waa dhaw yahay, waxaase loo baahan yahay in loo darbado, macnase kuma jiro in la warsado goortay imaan. Gaalana Alle wuu lacnaday ciqaab

daranna wuu u darbay iyagoo ku waari waligood, waxayna ku calaacali inay khasaareen markay maqleen warkii madaxdoodii jidka xaqa ah ka leexisay, iyagoo warsan Alle in kuwaas lacnadi ku dhaco cadaabkana loo laab laabo. Taasina waxay ku tusin xumaanta saaxiibka qalloocsan iyo war xun oo la maqlo inay sabab u tahay ciqaab daran iyo halaag ee waa in laga digtoonaado, wanaaggana laysku raaco laguna saaxiibo, xumaantana laga tago lays kuna maqlin, laguna saaxiibin, illeen waa luggooyee. **[Al-Axzaab: 63-68].**

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تَكُونُواْ كَٱلَّذِينَ ءَاذَوۡاْ مُوسَىٰ فَبَرَّأَهُ ٱللَّهُ مِمَّا قَالُواْۚ وَكَانَ عِندَ ٱللَّهِ وَجِيهٗا ٦٩

69. Kuwa (xaqa) rumeeyow ha noqonnina sidii kuwii dhibay (Nabi) Muuse oo Alle ka bari yeelay waxay (ku) sheegeen, Alle agtiisana wuxuu ku leeyahay waji (sharaf).

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱتَّقُواْ ٱللَّهَ وَقُولُواْ قَوۡلٗا سَدِيدٗا ٧٠

70. Kuwa (xaqa) rumeeyoow ka dhawrsada Alle hadal toosanna ku hadla.

يُصۡلِحۡ لَكُمۡ أَعۡمَٰلَكُمۡ وَيَغۡفِرۡ لَكُمۡ ذُنُوبَكُمۡۗ وَمَن يُطِعِ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ فَقَدۡ فَازَ فَوۡزًا عَظِيمًا ٧١

71. Haydiin wanaajiyo camalkiinna hana idiin dhaafo dambigiinnee, ruuxii adeeca Alle iyo Rasuulkiisa wuxuu u liibaanay dhab ahaan liibaan weyn.

إِنَّا عَرَضۡنَا ٱلۡأَمَانَةَ عَلَى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ وَٱلۡجِبَالِ فَأَبَيۡنَ أَن يَحۡمِلۡنَهَا وَأَشۡفَقۡنَ مِنۡهَا وَحَمَلَهَا ٱلۡإِنسَٰنُۖ إِنَّهُۥ كَانَ ظَلُومٗا جَهُولٗا ٧٢

72. Annagaa u bandhignay ammaanadda (cibaadada) samooyinka, dhulka iyo buuraha wayna diideen inay xambaaraan wayna ka cabsadeen xaggeeda, waxaase xambaaray dadka, wuxuuna noqday dulmi badane jahli badan.

لِّيُعَذِّبَ ٱللَّهُ ٱلۡمُنَٰفِقِينَ وَٱلۡمُنَٰفِقَٰتِ وَٱلۡمُشۡرِكِينَ وَٱلۡمُشۡرِكَٰتِ وَيَتُوبَ ٱللَّهُ عَلَى ٱلۡمُؤۡمِنِينَ وَٱلۡمُؤۡمِنَٰتِۚ وَكَانَ ٱللَّهُ غَفُورٗا رَّحِيمٗا ٧٣

73. Si Alle u cadaabo munaafiqiinta rag iyo haweenba iyo mushrikiinta (gaalada) rag iyo haweenba, uu kana toobad aqbalo mu'miniinta rag iyo haweenba, Alle na waa dambidhaafe naxariista.

Waxaa habboon inaan dhibaa la noqonnin sidii gaaladii dhibtay Nabi Muuse markuu xishood iyo sharaf kula dhex noolaa, Alle na ka fogeeyey kana bari yeelay waxay ku sheegeen, sharafna Alle agtiisa ugu yeelay. Waana in Alle laga yaabo hadal run ah oo xaq ahna lagu hadlo si Alle dambigeenna u dhaafo, markaan adeecno Alle iyo Rasuulkiisana aan u liibaanno liibaan wayn. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: ruuxii jecel inuu noqdo kan ugu sharaf badan Alle haka yaabo. Hadalka toosanna waa runta iyo xaqa. Alle na wuxuu u bandhigay cirka, dhulka iyo buurahaba inay qaadaan ammaano, taasoo ah cibaadada iyo waxa lays faray iyo waxa layska reebay wayse ka cudur daarteen kana cabsadeen, waxaase xambaaray dad oo dulmi iyo jahli ku dheehan si munaafiqiinta iyo gaalada loo cadaabo mu'miniintana looga toobad aqbalo, looguna dambi dhaafo. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: afar haddaad haysato wax kaama dhibo wixii kaa taga oo adduun ah, ilaalinta ammaanada, runta sheekada, fiicnida dabeecada iyo xalaalnimada cunnada. Waxaa wariyey Imaam Axmed». Albaanina waa sax ayuu yiri. **[Al-Axzaab: 69-73].**

Suurat Saba'

سُورَةُ سَبَإٍ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Mahad Alle ayaa iska leh ay awooddiisa ku jiraan waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan, mahadna isagaa muta aakharo iyo adduunba, waana falsame xeel dheer (wax walba oge).

ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ ٱلَّذِى لَهُۥ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِى ٱلْأَرْضِ وَلَهُ ٱلْحَمْدُ فِى ٱلْءَاخِرَةِ ۚ وَهُوَ ٱلْحَكِيمُ ٱلْخَبِيرُ ﴿١﴾

2. Wuxuuna ogyahay waxa dhulka gali iyo waxa ka soo bixi iyo waxa ka soo dagi samada iyo waxa u kori, waana naxariiste dambidhaafa ah.

يَعْلَمُ مَا يَلِجُ فِى ٱلْأَرْضِ وَمَا يَخْرُجُ مِنْهَا وَمَا يَنزِلُ مِنَ ٱلسَّمَآءِ وَمَا يَعْرُجُ فِيهَا ۚ وَهُوَ ٱلرَّحِيمُ ٱلْغَفُورُ ﴿٢﴾

3. Kuwii gaaloobay waxay dhaheen nooma imaaneyso saacadda (qiyaame), waxaad dhahdaa saas ma aha ee Rabbigay baan ku dhaartey way idiin imaan, Rabbigay waa wax maqan oge, wax darro la egna kagama qarsoona samooyinka iyo dhulka dhexdooda iyo wax waxaas ka yar iyo wax ka weyn midna, wax walbana kitaab cad bey ku sugan yihiin.

وَقَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ لَا تَأْتِينَا ٱلسَّاعَةُ ۖ قُلْ بَلَىٰ وَرَبِّى لَتَأْتِيَنَّكُمْ عَٰلِمِ ٱلْغَيْبِ ۖ لَا يَعْزُبُ عَنْهُ مِثْقَالُ ذَرَّةٍ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَلَا فِى ٱلْأَرْضِ وَلَآ أَصْغَرُ مِن ذَٰلِكَ وَلَآ أَكْبَرُ إِلَّا فِى كِتَٰبٍ مُّبِينٍ ﴿٣﴾

4. Si Alle u abaal mariyo kuwa rumeeyey (xaqa) oo camal fiican falay kuwaasna waxay mudan dambi dhaaf iyo risqi wanaagsan.

لِّيَجْزِىَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ لَهُم مَّغْفِرَةٌ وَرِزْقٌ كَرِيمٌ ﴿٤﴾

5. Kuwa u socda iney aayaadkannaga (ka leexdaan) iyagoo u maleyn iney daalin (Alle) kuwaasi waxay mudan cadaab daran oo xun.

وَٱلَّذِينَ سَعَوۡ فِيٓ ءَايَٰتِنَا مُعَٰجِزِينَ أُوْلَٰٓئِكَ لَهُمۡ عَذَابٞ مِّن رِّجۡزٍ أَلِيمٞ ٥

6. Waxey arki kuwii cilmiga la siiyeyna (mu'miniinta) in waxa laga soo dajiyey xagga Alle xaq yahey kuna hanuunin jidka Allaha adkaada ee la mahdiyo.

وَيَرَى ٱلَّذِينَ أُوتُواْ ٱلۡعِلۡمَ ٱلَّذِيٓ أُنزِلَ إِلَيۡكَ مِن رَّبِّكَ هُوَ ٱلۡحَقَّ وَيَهۡدِيٓ إِلَىٰ صِرَٰطِ ٱلۡعَزِيزِ ٱلۡحَمِيدِ ٦

Aayadahanu waxay caddeyn in Allaha cirka iyo dhulka waxa ku sugan xukuma ee maamula oo aakharo iyo adduunba iska leh ay mahadi u sugnaatey, wax kasta oo aduunka ka dhicina uu ogyahey, gaaladuse waxey diidi saacadda qiyaame iyo xaqa, wuuse keeni Allaha wax walba og si uu u abaal mariyo kuwa wanaagga faley iyo gaaladaba mid walba camalkiis, kuwa xaqa rumeeyeyse oo cilmiga la siiyey waxey ogyihiin in quraanku xaq yahey kuna hanuuniyo waddada Alle ee toosan. **[Saba': 1-6]**

7. Waxey dhaheen kuwii gaaaloobey maydin tusinnaa nin idiin ka warrami in marka laydin kala geeyo (jidhkiinna) kala gayn dhammaanteed in abuur cusub leydin abuuri.

وَقَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ هَلۡ نَدُلُّكُمۡ عَلَىٰ رَجُلٖ يُنَبِّئُكُمۡ إِذَا مُزِّقۡتُمۡ كُلَّ مُمَزَّقٍ إِنَّكُمۡ لَفِي خَلۡقٖ جَدِيدٍ ٧

8. Ma Alle ayuu ku been abuuran mase wuu waalan yahay, saas ma aha ee kuwaan rumeynin aakhiro waxay ku sugnaan cadaab iyo baadi fog.

أَفۡتَرَىٰ عَلَى ٱللَّهِ كَذِبًا أَم بِهِۦ جِنَّةُۢۗ بَلِ ٱلَّذِينَ لَا يُؤۡمِنُونَ بِٱلۡأٓخِرَةِ فِي ٱلۡعَذَابِ وَٱلضَّلَٰلِ ٱلۡبَعِيدِ ٨

9. Miyeyna arkaynin waxa hortooda ah iyo waxa gadaashooda ah oo samo iyo dhul ah haddaan doonno waxaannu la goyn dhulka, mise waxaan ku soo rideynaa goosimo samada ka mid ah arrintaasna

أَفَلَمۡ يَرَوۡاْ إِلَىٰ مَا بَيۡنَ أَيۡدِيهِمۡ وَمَا خَلۡفَهُم مِّنَ ٱلسَّمَآءِ وَٱلۡأَرۡضِۚ إِن نَّشَأۡ نَخۡسِفۡ بِهِمُ ٱلۡأَرۡضَ أَوۡ نُسۡقِطۡ عَلَيۡهِمۡ كِسَفٗا مِّنَ ٱلسَّمَآءِۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَأٓيَةٗ لِّكُلِّ عَبۡدٖ مُّنِيبٖ ٩

aayad baa ugu sugan addoon kastoo towbadkeen badan.

10. Dhab ahaan baan u siinnay Nabi Daawuud fadli (dheeraad) xaggannaga ah, waxaana nidhi buurahoow la celceliya tasbiixda, shimbirahoowna (la celceliya tasbiixda), waxaanna u jilcinney birta.

* وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا دَاوُۥدَ مِنَّا فَضْلًا ۖ يَٰجِبَالُ أَوِّبِى مَعَهُۥ وَٱلطَّيْرَ ۖ وَأَلَنَّا لَهُ ٱلْحَدِيدَ ﴿١٠﴾

11. Waxaanna ku nidhi ka samee diricyada (dharka dagaalka) sugna tixiddeeda, wanaagna fala, waxaad faleeysaanna waan arkaa.

أَنِ ٱعْمَلْ سَٰبِغَٰتٍ وَقَدِّرْ فِى ٱلسَّرْدِ ۖ وَٱعْمَلُوا۟ صَٰلِحًا ۖ إِنِّى بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿١١﴾

Gaaladu had iyo jeer waxay diidaan xaqa kana jeedsadaan, mar waxay inkiraan qiyaamada marna waxay Nabiga ku sheegaan been abuurte ama waalli, waxaase jirta iney baadi ku sugan yihiin meyse ku waana qaataan cirka iyo dhulka dhan walba ka jira, hadduu Alle doonana uu dhulka la goyn karo ama cirka ku soo ridi karo, ka dib wuxuu Alle ka waramay Nabi Daawuud si loogu waano qaato iyo in buuraha iyo shimbiruhu la tasbiixsan jireen, birtana loo jilciyey si uu uga sameeyo dharka dagaalka, Alle na farey inuu wanaag sameeyo, illeen Alle wax walba waa arkaaye. **[Saba': 7-11].**

12. Nabi Suleymaanna waxaan u sakhirray dabeysha, kallahaaddeedu waa bil, carraabaheeduna waa bil, waxaan u dureerinney il nuxaas ah (maar), jinnigana waxaa ka mid ah kuwo ku hor shaqeeya idanka Alle, ruuxii ka mid ah oo ka iisha amarkannaga waxaan dhadhansiineeynaa cadaabka saciiro.

وَلِسُلَيْمَٰنَ ٱلرِّيحَ غُدُوُّهَا شَهْرٌ وَرَوَاحُهَا شَهْرٌ ۖ وَأَسَلْنَا لَهُۥ عَيْنَ ٱلْقِطْرِ ۖ وَمِنَ ٱلْجِنِّ مَن يَعْمَلُ بَيْنَ يَدَيْهِ بِإِذْنِ رَبِّهِۦ ۖ وَمَن يَزِغْ مِنْهُمْ عَنْ أَمْرِنَا نُذِقْهُ مِنْ عَذَابِ ٱلسَّعِيرِ ﴿١٢﴾

13. Waxay u sameyn Suleymaan wuxuu doono oo mixraabyo (fooqaq) iyo suurooyin, iyo

يَعْمَلُونَ لَهُۥ مَا يَشَآءُ مِن مَّحَٰرِيبَ وَتَمَٰثِيلَ وَجِفَانٍ كَٱلْجَوَابِ

xeedhooyin dar oo kale ah, iyo dharyo sugan, waxaana ku nidhi fala ehelka Daawuudow mahadnaq, waxaana yar addoommadayda shugriga badan.

وَقُدُورٍ رَّاسِيَٰتٍ ۚ ٱعْمَلُوٓا۟ ءَالَ دَاوُۥدَ شُكْرًا ۚ وَقَلِيلٌ مِّنْ عِبَادِىَ ٱلشَّكُورُ ﴿١٣﴾

14. Markaan geerida ku xukunnay Nabi Suleymaan wax tusiyey geeridiisa ma jiro oon ahayn aboorka cunay ushiisa, markuu dhacay yaa waxaa u caddaaday jinnigii haddey waxa maqan og yihiin ineyna ku nagaadeen cadaab wax dulleeya (shaqadiisa darteed)

فَلَمَّا قَضَيْنَا عَلَيْهِ ٱلْمَوْتَ مَا دَلَّهُمْ عَلَىٰ مَوْتِهِۦٓ إِلَّا دَآبَّةُ ٱلْأَرْضِ تَأْكُلُ مِنسَأَتَهُۥ ۖ فَلَمَّا خَرَّ تَبَيَّنَتِ ٱلْجِنُّ أَن لَّوْ كَانُوا۟ يَعْلَمُونَ ٱلْغَيْبَ مَا لَبِثُوا۟ فِى ٱلْعَذَابِ ٱلْمُهِينِ ﴿١٤﴾

Markuu Alle sheegay qisadii Nabi Daawuud iyo waxa Alle siiyey wuxuu raaciyey qisadii wiilkiisa Nabi Suleymaan ahaa iyo in Alle u sakhiray dabeysha oo orod dheer kallahaad iyo carraababa mid walbana ay ku goyn in bil loo socdo maartana loo jilciyey, jinnigana ku shaqayn jiray amarka Alle iyagoo u sameyn guryo iyo sawirro iyo weelal iyo dharyo waawayn, farayna Daawuud iyo ehelkiisa iney Alle ku mahdiyaan, in kastoo dad mahad naqaa yar yahay, jinniguna inkastoo uu sheeganayey inuu ogyahay waxa maqan haddana waxaa ka qarsoomay geeridii Nabi Suleymaan oo sidii bay shaqada ugu jireen. Ilaa ushii uu ku tiirsanaa aboor cuno oo dhaco, hadday waxa maqan ogyihiin ma ayna wadeen shaqadaas adag, waxaana innagu waajib ah inaan rumeyno qisadaas Nabiyada sida quraanku inoo sheegay. **[Saba': 12-14]**

15. Guryihii reer Sabaad waxaa ku sugnayd calaamo, beeraana ka xigay xagga midig iyo xagga bidixba, waxaana Alle ku yidhi cuna risqiga Allihiin kuna mahadiya, waa balad wanaagsan iyo Alle dambi dhaaf badane.

لَقَدْ كَانَ لِسَبَإٍ فِى مَسْكَنِهِمْ ءَايَةٌ ۖ جَنَّتَانِ عَن يَمِينٍ وَشِمَالٍ ۖ كُلُوا۟ مِن رِّزْقِ رَبِّكُمْ وَٱشْكُرُوا۟ لَهُۥ ۚ بَلْدَةٌ طَيِّبَةٌ وَرَبٌّ غَفُورٌ ﴿١٥﴾

16. Wayse jeedsadeen, waxaanna ku dirnay daad daran, waxaanna ku badalney labadoodii beerood beero kale oo geedo khadhaadh iyo qoryo iyo sidri yar ah.

فَأَعْرَضُوا۟ فَأَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ سَيْلَ ٱلْعَرِمِ وَبَدَّلْنَٰهُم بِجَنَّتَيْهِمْ جَنَّتَيْنِ ذَوَاتَىْ أُكُلٍ خَمْطٍ وَأَثْلٍ وَشَىْءٍ مِّن سِدْرٍ قَلِيلٍ ﴿١٦﴾

17. Sidaasaana ku abaalmarinnay gaalnimadoodii darteed, abaalmarin xunna waxaan abaal marinnaa kuwa gaalnimada badan.

ذَٰلِكَ جَزَيْنَٰهُم بِمَا كَفَرُوا۟ ۖ وَهَلْ نُجَٰزِىٓ إِلَّا ٱلْكَفُورَ ﴿١٧﴾

18. Waxaanna yeelney dhexdooda (Yaman) iyo magaalooyinkii barakeysnaa (Shaam) magaalooyin muuqdo (oo xiriira) waxaanna qadarnay socodkooda, waxaana ku nidhi ku socda dhexdeeda habeen iyo maalinba idinkoo aamin ah.

وَجَعَلْنَا بَيْنَهُمْ وَبَيْنَ ٱلْقُرَى ٱلَّتِى بَٰرَكْنَا فِيهَا قُرًى ظَٰهِرَةً وَقَدَّرْنَا فِيهَا ٱلسَّيْرَ ۖ سِيرُوا۟ فِيهَا لَيَالِىَ وَأَيَّامًا ءَامِنِينَ ﴿١٨﴾

19. Waxayse dhaheen Allow noo kala fogee socodka, wayna dulmiyeen naftooda, waxaanna ka yeelnay wax lagu sheekeysto. Waanna kala goyney, sidaasna waxaa ugu sugan calaamo ruux kastoo samir badanoo mahadin badan.

فَقَالُوا۟ رَبَّنَا بَٰعِدْ بَيْنَ أَسْفَارِنَا وَظَلَمُوٓا۟ أَنفُسَهُمْ فَجَعَلْنَٰهُمْ أَحَادِيثَ وَمَزَّقْنَٰهُمْ كُلَّ مُمَزَّقٍ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَٰتٍ لِّكُلِّ صَبَّارٍ شَكُورٍ ﴿١٩﴾

Saba waxay aheyd dowlad ka dhisneyd Yaman oo Alle nimco siiyey dadkeeda, uuna faray inay cunaan nimcada Alle, kuna mahdiyaan, caabudaanna, weyse inkireen oo xaqa ka jeedsadeen, markaasaa Alle ku ciqaabay inuu ku sii daayo daad daran oo maansheeyey biyo xidheenka Ma'ribna kharribey markaasey u kala tageen adduunka, beerahoodii fiicnaana lagu badalay geedo khadhaadh oo xun. Kibirkoodii dartiis yaana saas loogu abaalmariyey, tan kale markii Alle ugu nicmeeyey magaalooyin is haya oy ku nastaan safarkooda xagga shaam yey warsadeen in loo kala fogeeyo, markaas Alle kala diray kana yeeley wax lagu sheekeysto, oo lagu cibraqaato. **[Saba': 15-19]**.

20. Dhab ahaan waxaa ku rumoobey gaalada korkooda ibliis malihiisii, wayna raaceen wax yar oo ka mid ah oo mu'miniin ah mooyee.

وَلَقَدْ صَدَّقَ عَلَيْهِمْ إِبْلِيسُ ظَنَّهُۥ فَٱتَّبَعُوهُ إِلَّا فَرِيقًا مِّنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٢٠﴾

21. Mu'miniinta awood kuma laha Ibliis wax kalana uma aannaan yeelin inaan kala ogaanno mooyee ruuxa rumeeyey aakhiro iyo kan ka shakisan xaggeeda. Rabbigaana wax walba waa ilaaliye.

وَمَا كَانَ لَهُۥ عَلَيْهِم مِّن سُلْطَٰنٍ إِلَّا لِنَعْلَمَ مَن يُؤْمِنُ بِٱلْءَاخِرَةِ مِمَّنْ هُوَ مِنْهَا فِى شَكٍّ ۗ وَرَبُّكَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ حَفِيظٌ ﴿٢١﴾

22. Waxaad dhahdaa u yeedha kuwaad sheegateen Alle ka sokow (iney ilaahyaal yihiin) kuma hantaan darro wax la eg samooyinka iyo dhulka midna, wax wadaag ahna «shirkadna» kuma leh dhexdooda, Alle wax u kaalmeeyana kuma laha khalqiga.

قُلِ ٱدْعُوا۟ ٱلَّذِينَ زَعَمْتُم مِّن دُونِ ٱللَّهِ لَا يَمْلِكُونَ مِثْقَالَ ذَرَّةٍ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَلَا فِى ٱلْأَرْضِ وَمَا لَهُمْ فِيهِمَا مِن شِرْكٍ وَمَا لَهُۥ مِنْهُم مِّن ظَهِيرٍ ﴿٢٢﴾

23. Kumana anfacdo shafeeco Alle agtiisa, ruuxuusan idmin. Markase laga faydo argagaxa quluubtooda waxay dhihi muxuu yidhi Allihiin, markaasey dhihi kuwa shafeeci wuxuu yidhi xaq waana Rabbiga sarreeya ee weyn.

وَلَا تَنفَعُ ٱلشَّفَٰعَةُ عِندَهُۥٓ إِلَّا لِمَنْ أَذِنَ لَهُۥ ۚ حَتَّىٰٓ إِذَا فُزِّعَ عَن قُلُوبِهِمْ قَالُوا۟ مَاذَا قَالَ رَبُّكُمْ ۖ قَالُوا۟ ٱلْحَقَّ ۖ وَهُوَ ٱلْعَلِىُّ ٱلْكَبِيرُ ﴿٢٣﴾

Ibliis lacanadi ha ku dhacdo wuxuu ku dhaartey inuu galaafan wax badan oo dadka ka mid ah, waxaana raacay wax badan, mu'miniinse awood kuma leh inuu duufsado Alle na wax walba waa awoodaa ee waxuu saas u falay imtixaan iyo in Alle kala ogaada mu'miniinta iyo gaalada. Wax cirka ama dhulka maamulkooda Alle la wadaagana ma jiro wax shafeecina ma jiro idanka Alle la'aantiis, Alle na had iyo jeer xaqa iyo runta yuu sheegaa, waxaana sugnaaday in Alle u dhihi Rasuulka (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee), qiyaamada: madaxa kor u qaad oo dheh waa lagu maqliye oo warso waa lagu siine oo shafeec waa lagaa shafeeco aqbaliye. **[Saba': 20-23]**

24. Waxaad dhahdaa yaa idinka arsaaqa samooyinka iyo dhulka, waxaad dhahdaa Alle, annaga

* قُلْ مَن يَرْزُقُكُم مِّنَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۖ قُلِ ٱللَّهُ ۖ وَإِنَّآ أَوْ إِيَّاكُمْ

iyo idinka mid un baa hanuunsan ama baadi cad ku sugan.

لَعَلَىٰ هُدًى أَوْ فِي ضَلَٰلٍ مُّبِينٍ ﴿٢٤﴾

25. Waxaad dhahdaa laydin warsan mahayo waxaan dambaabney annagana nalama warsado waxaad camalfaleysaan.

قُل لَّا تُسْـَٔلُونَ عَمَّآ أَجْرَمْنَا وَلَا نُسْـَٔلُ عَمَّا تَعْمَلُونَ ﴿٢٥﴾

26. Waxaad dhahdaa waxaa ina kulmin Rabbigeen, markaasuu ina kala xukumin si xaq ah waana caadil wax walb og.

قُلْ يَجْمَعُ بَيْنَنَا رَبُّنَا ثُمَّ يَفْتَحُ بَيْنَنَا بِٱلْحَقِّ وَهُوَ ٱلْفَتَّاحُ ٱلْعَلِيمُ ﴿٢٦﴾

27. Waxaad dhahdaa i tusiya kuwaad Alle haleeshiiseen oo (aad ka dhigteen) shurako (wax la wadaaga) saas ma aha ee Alle waa adkaade falsan.

قُلْ أَرُونِيَ ٱلَّذِينَ أَلْحَقْتُم بِهِۦ شُرَكَآءَ كَلَّا ۖ بَلْ هُوَ ٱللَّهُ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿٢٧﴾

Alle ayaa dadka iyo khalqiga kalaba ka arsaaqa cirka iyo dhulka, gaaladii horana haddii la warsado saasey ku jawaabi jireen, illeen wax kale oo roob keena ama doog soo bixiya ma jiraane. Xaquna waa mid kaliya, dambi ruux faleyna cid kale lama warsado, Alle na wuxuu kulmin dadka maalinta qiyaamaha wuxuuna u kala xukumi si cadaalad ah, wax cibaadada la wadaagana ma jiro, waxay gaaladu caabudi oo Alle ka soo hadhayna dhammaan waa wax kama jiraan beenbeen ah. **[Saba': 24-27]**

28. Kuumaannaan dirin waxaan dadkoo dhan ahayn, adoo u bishaaraynaya mu'miniinta, una digi gaalada, laakiin dadka badidiisu ma oga.

وَمَآ أَرْسَلْنَٰكَ إِلَّا كَآفَّةً لِّلنَّاسِ بَشِيرًا وَنَذِيرًا وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٢٨﴾

29. Waxayna dhihi waa goorma yaboohaasi (soo bixinta) haddaad run sheegaysaan.

وَيَقُولُونَ مَتَىٰ هَٰذَا ٱلْوَعْدُ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٢٩﴾

30. Waxaad dhahdaa waxaa idiin sugnaaday waqti aydaan saacad ka dib dhacaynin kana hor dhacaynin.

قُل لَّكُم مِّيعَادُ يَوْمٍ لَّا تَسْتَـْٔخِرُونَ عَنْهُ سَاعَةً وَلَا تَسْتَقْدِمُونَ ﴿٣٠﴾

وَقَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لَن نُّؤۡمِنَ بِهَٰذَا
ٱلۡقُرۡءَانِ وَلَا بِٱلَّذِي بَيۡنَ يَدَيۡهِۗ وَلَوۡ تَرَىٰٓ
إِذِ ٱلظَّٰلِمُونَ مَوۡقُوفُونَ عِندَ رَبِّهِمۡ
يَرۡجِعُ بَعۡضُهُمۡ إِلَىٰ بَعۡضٍ ٱلۡقَوۡلَ يَقُولُ
ٱلَّذِينَ ٱسۡتُضۡعِفُواْ لِلَّذِينَ ٱسۡتَكۡبَرُواْ لَوۡلَآ
أَنتُمۡ لَكُنَّا مُؤۡمِنِينَ ٣١

31. Waxay dheheenna kuwii galoobay rumeyn mayno quraankan iyo kuwii ka horreeyey midna, hadaad arki lahayd daalimiinta oo taagan Alle agtiisa (qiyaamada) oo qaarkood qaarka kale hadal u celin ooy ku dhihi kuwii raaciyadda ahaa kuwii madaxda ahaa ee isla waynaa haddaydaan jirin waxaan ahaan laheyn mu'miniin, (waxaad arki laheyd arin weyn oo lala yaabo).

Nabiga Muxamed ah (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) wuxuu Alle u diray dhammaan khalqiga si uu ugu bishaareeyo uguna digo, inkasta oo gaaladu diideen. Waxaana sugnaatay in Rasuulku (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) yidhi: (waxaa la ii bixiyey madow iyo casaan ba) «bukhaari iyo muslim yaa jaabir binu cabdullaahi ka wariyey». Qiyaamada waqti bay leedahay ayna ka dib dhacayn kana hormarayn, quraanka iyo kutubtii ka horraysayna gaaladii way diideen oo beeniyeen, muxuuse u tari calaacal markay qiyaamada tagaan Alle agtiisa ooy doodaan raaciye iyo madaxba. **[Saba': 28-31].**

قَالَ ٱلَّذِينَ ٱسۡتَكۡبَرُواْ لِلَّذِينَ ٱسۡتُضۡعِفُوٓاْ
أَنَحۡنُ صَدَدۡنَٰكُمۡ عَنِ ٱلۡهُدَىٰ بَعۡدَ إِذۡ
جَآءَكُمۡ بَلۡ كُنتُم مُّجۡرِمِينَ ٣٢

32. Kuwii iskibriyey (madaxdii) waxay ku dhaheen kuwii tabarta yaraa (raaciyaddii) ma annagaa idinka celinnay hanuunka markuu idiin yimid, saas ma aha ee idinkaa danbiilayaal ahaa.

وَقَالَ ٱلَّذِينَ ٱسۡتُضۡعِفُواْ لِلَّذِينَ ٱسۡتَكۡبَرُواْ
بَلۡ مَكۡرُ ٱلَّيۡلِ وَٱلنَّهَارِ إِذۡ تَأۡمُرُونَنَآ أَن
نَّكۡفُرَ بِٱللَّهِ وَنَجۡعَلَ لَهُۥٓ أَندَادٗاۚ وَأَسَرُّواْ
ٱلنَّدَامَةَ لَمَّا رَأَوُاْ ٱلۡعَذَابَۚ وَجَعَلۡنَا
ٱلۡأَغۡلَٰلَ فِيٓ أَعۡنَاقِ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْۖ هَلۡ
يُجۡزَوۡنَ إِلَّا مَا كَانُواْ يَعۡمَلُونَ ٣٣

33. Kuwii tabarta yaraa (raaciyaddii) waxay ku dhaheen kuwii iskibriyay (madaxdii): saas ma aha ee waxaa hanuunka naga celiyay dhagartii habeen iyo maalinba markaad na farayseen inaan Alle ka gaalowno una yeelno shariigyo, waxay qarsadaan qoomamo markay

arkeen cadaabka, waxaanna yeellay kuwii gaaloobay luquntooda qoolal biro naar ah. Miyaa laga abaalmarini gaaladu waxay camal faleen mooyee.

Sida aayado badanba caddeeyeen maalinta qiyaamo nafwalba waxay iska fogeyn danbiga ruuxa kale, aayadahanna waxay caddayn in maalinta qiyaame ay doodi dhex mari madaxdii iyo kuway xukumi jireen ee xaqa ka leexday oo raaciyaddii ay eersan madaxdii markey arkaan dhibaatada qiyaamaha iyo cadibaadda daran iyagoo sheegi haddayna madaxdaas baasi jirin ooynan xaqa ka leexinin inay toosnaan lahaayeen, hase yeeshee waxay ugu jawaabeen kuwii madaxda ahaa ineyna dhuminnin iyagoo ee ay ahaayeen kuwo iskood u xun, dharaartaana way qoomammoodeen markay arkeen cadaabka loo darbay, maxayse anfici qoomammo markaas oo kale, taasina waxay ka digi inaan xumaan iyo Alle caasi lagu raacin laguna adeecin cidna. **[Saba': 32-33].**

وَمَآ أَرۡسَلۡنَا فِي قَرۡيَةٖ مِّن نَّذِيرٍ إِلَّا قَالَ مُتۡرَفُوهَآ إِنَّا بِمَآ أُرۡسِلۡتُم بِهِۦ كَٰفِرُونَ ﴿٣٤﴾

34. Magaalo kasta oo aan dige (Nabi) u dirro waxay dhahaan kuwoodii loo nicmeeyay annagu waxa laydiinku soo diray waan ka gaalownay.

وَقَالُواْ نَحۡنُ أَكۡثَرُ أَمۡوَٰلٗا وَأَوۡلَٰدٗا وَمَا نَحۡنُ بِمُعَذَّبِينَ ﴿٣٥﴾

35. Waxayna dhaheen annagaa xoolo iyo carruurba idinka badan, nalamana cadaabayo.

قُلۡ إِنَّ رَبِّي يَبۡسُطُ ٱلرِّزۡقَ لِمَن يَشَآءُ وَيَقۡدِرُ وَلَٰكِنَّ أَكۡثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يَعۡلَمُونَ ﴿٣٦﴾

36. Waxaad dhahdaa Allehay wuxuu u fidiyaa rizqiga ruuxuu doono, wuuna ku cidhiidhiyaa ruuxuu doono, laakiin dadka badankiisu ma oga.

وَمَآ أَمۡوَٰلُكُمۡ وَلَآ أَوۡلَٰدُكُم بِٱلَّتِي تُقَرِّبُكُمۡ عِندَنَا زُلۡفَىٰٓ إِلَّا مَنۡ ءَامَنَ وَعَمِلَ صَٰلِحٗا فَأُوْلَٰٓئِكَ لَهُمۡ جَزَآءُ ٱلضِّعۡفِ بِمَا عَمِلُواْ وَهُمۡ فِي ٱلۡغُرُفَٰتِ ءَامِنُونَ ﴿٣٧﴾

37. Ma aha xoolahiinnu iyo carruurtiinnu kuwii noo kiin dhaweeya, hase yeeshee ruuxii rumeeya (xaqa) oo camal fiican fala, kuwaas waxaa u sugnaaday abaalmarin labalaab ah camalkooda dartiis, waxayna ku aammin noqdaan qawlado janno.

Aayadahan oo kale waa ku badan yihiin quraanka Nabigaana lagu calool adkayn, waxaana caado ah in dadku marka ay dhargaan ay kibraan xaqana diidaan kuwuuse Alle doono wuu ka soo reebaa, carruur iyo xoolana wax lagu faano ma aha maxaa yeeley kuma tusiso jeclaanta Alle cadaabna kaa furan mayso, risqiguna Alle awooddiisa yuu ku jiraa, cidduu doonana waa u waasicin, cidduu doonana wuu ku cidhiidhin, imtixaan dartiis, waxaase Alle loogu dhawaadaa rumayn xaqa iyo camal fiican, kuwa saas falana waxay ku aammin noqon jannada Alle qawladaheeda, waxase muhim ka ah waa in la ogaado inuusan ahayn qiimuhu xoolo badan, carruur, madaxtinnimo iyo hodantinnimo adduun ee sharaf iyo wanaag waa xaqoo lagu tooso iyo wanaag jacayl. **[Saba': 34-37].**

وَٱلَّذِينَ يَسۡعَوۡنَ فِيٓ ءَايَٰتِنَا مُعَٰجِزِينَ أُوْلَٰٓئِكَ فِي ٱلۡعَذَابِ مُحۡضَرُونَ ٣٨

38. Kuwa u socda (burinta iyo deminta nuurka) aayaadkannaga iyagoo is leh Alle daaliya, kuwaas waxaa lagu kulmin cadaab.

قُلۡ إِنَّ رَبِّي يَبۡسُطُ ٱلرِّزۡقَ لِمَن يَشَآءُ مِنۡ عِبَادِهِۦ وَيَقۡدِرُ لَهُۥۚ وَمَآ أَنفَقۡتُم مِّن شَيۡءٖ فَهُوَ يُخۡلِفُهُۥۖ وَهُوَ خَيۡرُ ٱلرَّٰزِقِينَ ٣٩

39. Waxaad dhahdaa Allehay wuxuu risqiga u fidiyaa cidduu doono oo addoommadiisa ka mid ah, kuu doonana wuu ku cidhiidhyaa, waxaad bixisaan oo kastana Alle ayaa idiin bedeli, Alle na isagaa u khayr roon wax wax arsaaqa.

وَيَوۡمَ يَحۡشُرُهُمۡ جَمِيعٗا ثُمَّ يَقُولُ لِلۡمَلَٰٓئِكَةِ أَهَٰٓؤُلَآءِ إِيَّاكُمۡ كَانُواْ يَعۡبُدُونَ ٤٠

40. Xusuuso maalinta uu Alle kulmin dhammaan gaalada, markaas uu ku odhan malaa'igtiisa kuwani ma idinkay idin caabudi jireen.

قَالُواْ سُبۡحَٰنَكَ أَنتَ وَلِيُّنَا مِن دُونِهِمۖ بَلۡ كَانُواْ يَعۡبُدُونَ ٱلۡجِنَّۖ أَكۡثَرُهُم بِهِم مُّؤۡمِنُونَ ٤١

41. Markaas ay dhihi adaa ceeb ka fog Allow, adaa gargaarahannaga ah iyaga ka sokay, waxayse caabudi jireen jinni badidoodna iyagay rumaysnaayeen.

فَٱلۡيَوۡمَ لَا يَمۡلِكُ بَعۡضُكُمۡ لِبَعۡضٖ نَّفۡعٗا وَلَا ضَرّٗا وَنَقُولُ لِلَّذِينَ ظَلَمُواْ

42. Maantase «qiyaamada» uma hanato qaarkiin qaarka kale nacfi iyo dhib midna. Waxaanna

ku dhahaynaa kuwii dulmi falay dhadhamiya cadaabka naartaad beeninayseen.

ذُوقُواْ عَذَابَ ٱلنَّارِ ٱلَّتِي كُنتُم بِهَا تُكَذِّبُونَ ﴿٤٢﴾

Diinta Alle waa xaq waafaqsan abuuridda dadka wanaagsan, ciddiise isku dayda inay la dagaallanto dadkana ka celiso isagaa luggooyo ku dhici kuna dambayn cadaab iyo halaag, tan kale ruux kasta oo Alle risqi badan siiyay ama ku cidhiidhya oo wax bixiya Alle wuu u badali oo wax khayr leh yuu u daba marin. Alle kaliya yaana muta cibaado, maalinta qiyaamana waxa la soo kulmin caabudihii iyo la caabudihii Alle ka soo hadhay waxna isuma tarayaan, naar baana lagu abaal marin, kuwaan in la caabudo raalli ka ahaynse kuma jiraan. **[Saba': 38-42].**

وَإِذَا تُتْلَىٰ عَلَيْهِمْ ءَايَٰتُنَا بَيِّنَٰتٍ قَالُواْ مَا هَٰذَآ إِلَّا رَجُلٌ يُرِيدُ أَن يَصُدَّكُمْ عَمَّا كَانَ يَعْبُدُ ءَابَآؤُكُمْ وَقَالُواْ مَا هَٰذَآ إِلَّآ إِفْكٌ مُّفْتَرًى ۚ وَقَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لِلْحَقِّ لَمَّا جَآءَهُمْ إِنْ هَٰذَآ إِلَّا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿٤٣﴾

43. Marka lagu akhriyo korkooda aayaadkannaga waxay dhahayaan kani ma aha mid dooni inuu idinka iilo waxay aabbayowgiin caabudi jireen mooyee mid kale, waxayna dheheen kan (quraanku) ma aha waxaan beenabuurasho ahayn, waxayna dhaheen kuwii gaaloobay xaqu markuu u yimid kani waxaan sixir muuqda ahayn ma aha.

وَمَآ ءَاتَيْنَٰهُم مِّن كُتُبٍ يَدْرُسُونَهَا ۖ وَمَآ أَرْسَلْنَآ إِلَيْهِمْ قَبْلَكَ مِن نَّذِيرٍ ﴿٤٤﴾

44. Ma aannaan siinnin kutubo ay akhriyaan, umana aannaan dirin (carabta) xaggooda dige kaa horreeyay.

وَكَذَّبَ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ وَمَا بَلَغُواْ مِعْشَارَ مَآ ءَاتَيْنَٰهُمْ فَكَذَّبُواْ رُسُلِى ۖ فَكَيْفَ كَانَ نَكِيرِ ﴿٤٥﴾

45. Waxay beeniyeen (xaqa) kuwii ka horreeyayna, mana gaadhin (kuwii Nabiga beeniyay) toban meelood meel waxaan siinnay kuwaas, waxayna beeniyeen rasuulladaydii, sayse noqotay ciqaabtaydii (aan ciqaabay kuwaas xaqa beeniyay).

Alle wuxuu ka warrami gaaladii iyo siday ciqaab daran u muteen markay beeniyeen xaqii Nabiga loo soo dhiibay ayna afxumeeyeen Nabigii (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) kuna sheegeen inuu ka leexin waxay aabayoowgood caabudi jireen, ayna ku sheegeen been abuur iyo sixir, taasna waa caadada jaahiliinta aan fikiraynin xaqana aan dhab u eegaynin, waxayna ahaayeen intaan Nabiga loo dirin kuwo jeclaa in wax u diga loo soo diro, maxaa yeelay kitaab iyo Nabi midna horay uma lahayn, waxaase roonayd inay ku waano qaataan gaaladii ka horreysay ee xaqa beeniyey kana xoog badnaa iyaga Alle na ciqaabay. **[Saba': 43-45].**

* قُلْ إِنَّمَآ أَعِظُكُم بِوَٰحِدَةٍ ۖ أَن تَقُومُوا۟ لِلَّهِ مَثْنَىٰ وَفُرَٰدَىٰ ثُمَّ تَتَفَكَّرُوا۟ ۚ مَا بِصَاحِبِكُم مِّن جِنَّةٍ ۚ إِنْ هُوَ إِلَّا نَذِيرٌ لَّكُم بَيْنَ يَدَىْ عَذَابٍ شَدِيدٍ ﴿٤٦﴾

46. Waxaad dhahdaa Nabiyow mid kaliya yaan idinku waanin inaad u jahaysataan Alle laba labo iyo mid mid markaasna aad fikirtaan inaan saaxiibkiin «Nabiga Muxamed ah» uusan waallayn, uu digihiinna cadaab daran hortiisna uu yahay.

قُلْ مَا سَأَلْتُكُم مِّنْ أَجْرٍ فَهُوَ لَكُمْ ۖ إِنْ أَجْرِىَ إِلَّا عَلَى ٱللَّهِ ۖ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ شَهِيدٌ ﴿٤٧﴾

47. Waxaad dhahdaa Nabiyow waxaan idin warsaday oo ujuuro ah idinkaa iska leh (waxba idinkama doonayo), ujuuradayda Alle unbaa isiin, wax walbana Alle wuu daalacan.

قُلْ إِنَّ رَبِّى يَقْذِفُ بِٱلْحَقِّ عَلَّٰمُ ٱلْغُيُوبِ ﴿٤٨﴾

48. Waxaad dhahdaa Allehay xaquu soo dajiyaa (xumaanta ku baabi'iyaa), waana wax maqan oge badane.

قُلْ جَآءَ ٱلْحَقُّ وَمَا يُبْدِئُ ٱلْبَٰطِلُ وَمَا يُعِيدُ ﴿٤٩﴾

49. Waxaad dhahdaa xaqii waa yimid, baadilna waa tirtirmay.

قُلْ إِن ضَلَلْتُ فَإِنَّمَآ أَضِلُّ عَلَىٰ نَفْسِى ۖ وَإِنِ ٱهْتَدَيْتُ فَبِمَا يُوحِىٓ إِلَىَّ رَبِّىٓ ۚ إِنَّهُۥ سَمِيعٌ قَرِيبٌ ﴿٥٠﴾

50. Waxaad dhahdaa haddaan dhumo waxaan uun u dhumay naftayda, haddaan hanuunana waa wixii Alle ii waxyooday sababtiisa, Alle waa maqle dhawe.

Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee), wuxuu Alle faray inuu gaalada ku yiraahdo waxaan idinku waanin inaad labo labo iyo mid mid u fikirtaan si aad u ogaataan inuusan Nabigu waallayn ee uu ka digi cadaab daran, wax xoolo iyo ujuura ahna uusan warsanaynin, ee ujuuradiisu Alle xaggiisa tahay illeen Alle ayaa wax walba u marag ah oo daalacane, xaqana Alle ayaa ku baabi'iya xumaanta iyo baadilka, Nabiguna ma dhunsana, haddiibase la qaddaro inuu dhunsan yahay isagay dhibi, hadduu xaq ku taagan yahay, waana dhabtee, waana waxyiga iyo mahadda Alle e, maxay gaalo samayn, Alle na wuu maqli, dhaw yahayna. **[Saba': 46-50].**

51. Hadaad arki lahayd Nabiyow markay argagaxaan gaaladu oo meeley u cararaan jirin oo meel dhaw laga qabto, (waxaad arki lahayd arrin wayn).

وَلَوْ تَرَىٰٓ إِذْ فَزِعُواْ فَلَا فَوْتَ وَأُخِذُواْ مِن مَّكَانٍ قَرِيبٍ ﴿٥١﴾

52. Waxay dhihi markaas waxaan rumaynay (xaqa) xaggay uga ahaan inay meel fog wax ka qaataan (rumayn).

وَقَالُوٓاْ ءَامَنَّا بِهِۦ وَأَنَّىٰ لَهُمُ ٱلتَّنَاوُشُ مِن مَّكَانٍۭ بَعِيدٍ ﴿٥٢﴾

53. Dhab ahaanna waa iyagii uga gaaloobay xaqa horay, oo ay ka tuurayeen waxayan ogayn (iyo malamalo) meel xaqa ka fog.

وَقَدْ كَفَرُواْ بِهِۦ مِن قَبْلُ ۖ وَيَقْذِفُونَ بِٱلْغَيْبِ مِن مَّكَانٍۭ بَعِيدٍ ﴿٥٣﴾

54. Waana la kala ooday iyaga iyo waxay doonayeen sidii lagu falay kuwii la midka ahaa ee ka horreeyay, waxayna ahaayeen kuwa shaki daran ku sugan.

وَحِيلَ بَيْنَهُمْ وَبَيْنَ مَا يَشْتَهُونَ كَمَا فُعِلَ بِأَشْيَاعِهِم مِّن قَبْلُ ۚ إِنَّهُمْ كَانُواْ فِى شَكٍّ مُّرِيبٍ ﴿٥٤﴾

Qiyaamadu waa maalin daran, oo dhib iyo shiddo badan lagana argagaxo, markase gaalada si kada ah loo qabto, waqti wax la rumeeyana dhammaaday oo fogaaday illeen adduunkii bay ahayde, iyana waa kuwii adduunka ku gaaloobay ee xaqa beeniyey ee jaahilnimo iyo wax walba oo xumaan ah ku sheegay waxay jeclaayeenna la kala dheereeyo oo la kala awdo sidii lagu falay kuwii la midka ahaa ee ka horreeyey illeen xaqay shakiyeene, muxuu tari calaacal iyo catow, ruuxii caqli lehse waa inuu xaqa si fiican ugu taagnaado, si uu u nabadgalo. Qataade wuxuu yidhi: iska jira shaki illeen ruuxii shaki ku dhinta waa lagu soo bixin, ruuxii yaqiin ku dhinta waa lagu soo bixine. **[Saba': 51-54].**

Suurat Faadhir

سُورَةُ فَاطِرٍ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ فَاطِرِ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ
جَاعِلِ ٱلْمَلَٰٓئِكَةِ رُسُلًا أُو۟لِىٓ أَجْنِحَةٍ
مَّثْنَىٰ وَثُلَٰثَ وَرُبَٰعَ ۚ يَزِيدُ فِى ٱلْخَلْقِ مَا
يَشَآءُ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿١﴾

1. Mahad Allaha billaabay «abuuray» samooyinka iyo dhulka yaa leh kana yeelay malaa'igta farriin wadeyaal, oo garbo labo labo ah iyo saddex saddex iyo afar afar ah leh, wuuna siyaadiyaa Alle abuuridduu doono, Alle na wax walba wuu karaa.

مَّا يَفْتَحِ ٱللَّهُ لِلنَّاسِ مِن رَّحْمَةٍ فَلَا
مُمْسِكَ لَهَا ۖ وَمَا يُمْسِكْ فَلَا مُرْسِلَ لَهُۥ
مِنۢ بَعْدِهِۦ ۚ وَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿٢﴾

2. Wixii Alle dadka ugu nicmeeyo oo naxariis ah wax celin karaa ma jiro, wuxuu celiyana wax sii dayn kara ma jiro dabadiis, waana adkaade falsan.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ ٱذْكُرُوا۟ نِعْمَتَ ٱللَّهِ
عَلَيْكُمْ ۚ هَلْ مِنْ خَٰلِقٍ غَيْرُ ٱللَّهِ
يَرْزُقُكُم مِّنَ ٱلسَّمَآءِ وَٱلْأَرْضِ ۚ لَآ إِلَٰهَ
إِلَّا هُوَ ۖ فَأَنَّىٰ تُؤْفَكُونَ ﴿٣﴾

3. Dadow xusuusnaada nicmada Alle ee korkiinna ah, abuure kale ma jiraa oo Alle ka soo hadhay oo idinka arsuqi samada iyo dhulka, Alle mooyee ilaah kale oo xaq lugu caabudo ma jiro ee xaggee laydiin ka iili xaqa.

Allaha cirka iyo dhulka abuura ee malaa'igta diray wax walbana kara yaa mahad mudan, khayr kuu keenana wax celin kara ma jiro, wuxuu reebana wax keeni karaa ma jiro, dadkana waxaa waajib ku ah inay xusuustaan nicmada Alle iyo inaan Alle mooyee cid kale wax ka arsuqaynin cirka iyo dhulka. Ibnu Cabaas (Alle isaga iyo aabihiisba ha ka raalli noqdee) wuxuu yidhi: ma

aqoonnin macnaha faadir intaan uga imaado laba nin oo ka mid ah baadiyaha carbeed oo ku doodi ceel oo mid kood ku yidhi kii kale: anaa fadiray (bilaabay qodidda). **[Faadhir: 1-3].**

وَإِن يُكَذِّبُوكَ فَقَدْ كُذِّبَتْ رُسُلٌ مِّن قَبْلِكَ ۚ وَإِلَى ٱللَّهِ تُرْجَعُ ٱلْأُمُورُ ﴿٤﴾

4. Hadday ku beeniyaan waxaa dhab ahaan loo beeniyay rasuulladii kaa horreeyay, Alle xagiisaana loo celin umuuraha.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِنَّ وَعْدَ ٱللَّهِ حَقٌّ ۖ فَلَا تَغُرَّنَّكُمُ ٱلْحَيَوٰةُ ٱلدُّنْيَا وَلَا يَغُرَّنَّكُم بِٱللَّهِ ٱلْغَرُورُ ﴿٥﴾

5. Dadaw yabooha Alle waa xaq ee yayna idin kedin nolasha adduunyo, yuuna idinku kedin Alle ku kedin badane ah (shaydaan).

إِنَّ ٱلشَّيْطَـٰنَ لَكُمْ عَدُوٌّ فَٱتَّخِذُوهُ عَدُوًّا ۚ إِنَّمَا يَدْعُوا۟ حِزْبَهُۥ لِيَكُونُوا۟ مِنْ أَصْحَـٰبِ ٱلسَّعِيرِ ﴿٦﴾

6. Shaydaanku waa colkiin ee idinna col ka yeesha, wuxuuna idiin ku yeedhi uun xisbigiisa si ay asaxaabta naaarta saciiro u noqdaan.

ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ لَهُمْ عَذَابٌ شَدِيدٌ ۖ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّـٰلِحَـٰتِ لَهُم مَّغْفِرَةٌ وَأَجْرٌ كَبِيرٌ ﴿٧﴾

7. Kuwii gaaloobay waxay mudan cadaab daran, kuwii xaqa rumeeyay oo camal fiican falayna waxay mudan dambi dhaaf iyo ajri wayn.

أَفَمَن زُيِّنَ لَهُۥ سُوٓءُ عَمَلِهِۦ فَرَءَاهُ حَسَنًا ۖ فَإِنَّ ٱللَّهَ يُضِلُّ مَن يَشَآءُ وَيَهْدِى مَن يَشَآءُ ۖ فَلَا تَذْهَبْ نَفْسُكَ عَلَيْهِمْ حَسَرَٰتٍ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلِيمٌۢ بِمَا يَصْنَعُونَ ﴿٨﴾

8. Ruuxse loo qurxiyay camalkiisa xun oo u arkay inuu fiican yahay (ma la mid baa kaan saas falin), Alle cidduu doono yuu dhumiyaa ruuxuu doonana wuu hanuuniyaa ee yeyna naftaadu ku tagin walbahaarkooda, Alle waa ogyahay waxay samayne.

Alleheen had iyo jeer wuxuu calool adkayn jiray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) wuxuuna xusuusin jiray Nabiyadii hore iyo waxay kala kulmeen gaaladii oo dhib iyo beenin ah, tan kale wuxuu Alle yabooho wuu dhici, mana habboona in lagu kadsoomo adduunyo, shaydaan kugu

kadiyo, illeen waa colka bini Aadamkee wuxuuna dooni inaad ka mid noqotid xisbigiisa si aad saciiro ula gashid, xumaanle iyo wanaaglena ma sinna, mana aha in xumaantu kula quruxsanaato, kulana fiicnaato, waase in Alle hanuun la warsado xumaantana laga leexdo, Nabiguna waxba kama saarna ciddii iska dhunta oo shaydaan adeecda. **[Faadhir: 4-8].**

وَٱللَّهُ ٱلَّذِىٓ أَرۡسَلَ ٱلرِّيَٰحَ فَتُثِيرُ سَحَابٗا فَسُقۡنَٰهُ إِلَىٰ بَلَدٖ مَّيِّتٖ فَأَحۡيَيۡنَا بِهِ ٱلۡأَرۡضَ بَعۡدَ مَوۡتِهَاۚ كَذَٰلِكَ ٱلنُّشُورُ ٩

9. Alle waa kan diray dabaysha oy kiciso daruuro markaasaan u kaxayn magaalo dhimatay (abaarowday) markaasaan ku noolaynay roobkaas dhulka intuu dhintay ka dib, saas weeye soo bixintiina.

مَن كَانَ يُرِيدُ ٱلۡعِزَّةَ فَلِلَّهِ ٱلۡعِزَّةُ جَمِيعًاۚ إِلَيۡهِ يَصۡعَدُ ٱلۡكَلِمُ ٱلطَّيِّبُ وَٱلۡعَمَلُ ٱلصَّٰلِحُ يَرۡفَعُهُۥۚ وَٱلَّذِينَ يَمۡكُرُونَ ٱلسَّيِّـَٔاتِ لَهُمۡ عَذَابٞ شَدِيدٞۖ وَمَكۡرُ أُوْلَٰٓئِكَ هُوَ يَبُورُ ١٠

10. Ruuxii dooni sharaf Alle ayaa iska leh sharaf dhammaanteed, xaggiisayna u koraan kalimooyinka fiican, camalka suubanna wuu kor yeelaa, kuwa xumaanta ku dhagra (maamula) waxay mudan cadaab daran, dhagarta kuwaasna way uun halaagmi.

وَٱللَّهُ خَلَقَكُم مِّن تُرَابٖ ثُمَّ مِن نُّطۡفَةٖ ثُمَّ جَعَلَكُمۡ أَزۡوَٰجٗاۚ وَمَا تَحۡمِلُ مِنۡ أُنثَىٰ وَلَا تَضَعُ إِلَّا بِعِلۡمِهِۦۚ وَمَا يُعَمَّرُ مِن مُّعَمَّرٖ وَلَا يُنقَصُ مِنۡ عُمُرِهِۦٓ إِلَّا فِي كِتَٰبٍۚ إِنَّ ذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ يَسِيرٞ ١١

11. Alle waa kan idinka abuuray carro, haddana dhibic, markaas lab iyo dhaddig, haweenayna wax uurka kuma qaaddo mana dajiso ogaansho Alle mooyee, ruuxii cimriga loo dheereeyo iyo ruuxii cimriga loo gaabiyaba waxay ku sugan yihiin kitaabka Alle, waana u fudud yahay.

Roobka Alle ayaa keena siduu dabaysha roobka hor socotaba u keeno, roobkaasoo uu ku nooleeyo magaalo abaarowday doogna ka soo baxo sidaasaana loo soo bixin dadka qiyaamada, sharaf iyo cisiba Alle ayaa iska leh dhammaanteed, wanaagguna Alle ayuu u koraa, sida uu u kor yeelo camallada fiican, xumaan iyo dhagarna saaxiibkeeda unbay dishaa oy halaagi, Alle na waa kan dadka carro ka abuuray (aabbahood Aadan) haddana candhuuf ka abuuray, kana

dhiga rag iyo haween, wax kastana waa ogyahay Alle, uur haweenay, dhalidda, cimriga dheer kan gaaban, wax walbana Alle waa u fudud yahay, Xasan Basri wuxuu yidhi: hadal lama aqbalo camal la'aan tiis. **[Faadhir: 9-11].**

12. Ma eka labada badood taasi waa macaan tahay si daran, taasina waa dhanaan daran, mid kastana waxaad ka cunaysaan hilib cusub, waxaadna kala baxdaan macdan aad xidhataan, waxaadna arkaysaan doonta oo jiidhi si aad u dalabtaan fadliga Alle iyo inaad ku mahadisaan.

وَمَا يَسْتَوِى ٱلْبَحْرَانِ هَٰذَا عَذْبٌ فُرَاتٌ سَآئِغٌ شَرَابُهُۥ وَهَٰذَا مِلْحٌ أُجَاجٌ ۖ وَمِن كُلٍّ تَأْكُلُونَ لَحْمًا طَرِيًّا وَتَسْتَخْرِجُونَ حِلْيَةً تَلْبَسُونَهَا ۖ وَتَرَى ٱلْفُلْكَ فِيهِ مَوَاخِرَ لِتَبْتَغُوا۟ مِن فَضْلِهِۦ وَلَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿١٢﴾

13. Habeenka yuu Alle dhexgaliyaa maalinta, maalintana wuxuu dhexgaliya habeenka, qorraxda iyo dayaxana wuu sakhiray mid kastana wuxuu ku socdaa muddo magacaaban, saas waxa falana waa Allihiin, isagaana xukunka iska leh, waxaadse baryeysaan (caabudaysaan) oo Alle ka soo hadhay ma hantaan xuub laf timireed.

يُولِجُ ٱلَّيْلَ فِى ٱلنَّهَارِ وَيُولِجُ ٱلنَّهَارَ فِى ٱلَّيْلِ وَسَخَّرَ ٱلشَّمْسَ وَٱلْقَمَرَ ۖ كُلٌّ يَجْرِى لِأَجَلٍ مُّسَمًّى ۚ ذَٰلِكُمُ ٱللَّهُ رَبُّكُمْ لَهُ ٱلْمُلْكُ ۚ وَٱلَّذِينَ تَدْعُونَ مِن دُونِهِۦ مَا يَمْلِكُونَ مِن قِطْمِيرٍ ﴿١٣﴾

14. Haddaad u yeedhataana idin ma maqlaan, haday idinbase maqlaan wax idiinma taraan, qiyaamadana way diidi gaalnimadiinna, cid wax og sidaanna wax kuugu warrama ma jiro.

إِن تَدْعُوهُمْ لَا يَسْمَعُوا۟ دُعَآءَكُمْ ۖ وَلَوْ سَمِعُوا۟ مَا ٱسْتَجَابُوا۟ لَكُمْ ۖ وَيَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ يَكْفُرُونَ بِشِرْكِكُمْ ۚ وَلَا يُنَبِّئُكَ مِثْلُ خَبِيرٍ ﴿١٤﴾

Wabiyada iyo badaha Alle ayaa dureeriya qaarna macaaneeya qaar kalana kharaareeya, cunno iyo kalluunna mid kasta ku beeray si hilib nadiif ah loogu cuno jowharna loogala baxo, doonyuhuna u dhex mushaaxaan, si ay khayraadka Alle u raadsadaan, looguna mahdiyo; habeenka, maalinta, qorraxda, iyo dayaxaba Alle ayaa sakhiray si ay u shaqeeyaan tan iyo muddadii

loo qabtay, xukunka caalamka iyo awooddiisana Alle ayaa iska leh, wax la wadaaga oo wax laga baryi ama wax maqli ama wax ajiibana ma jiro, qof sida Allaha wax walba og wax kuugu caddeeyana ma jiro. **[Faadhir: 12-14].**

15. Dadow idinka unbaa fuqara ah (u baahan) Alle, Alle na waa hodan ammaanan.

16. Hadduu doono wuu idin dhammayn wuxuuna keeni kuwo cusub.

17. Arrintaasna wax Alle ku culus ma aha.

18. Nafna naf kale dambigeed ma qaaddo, haddii loogu yeedho naf culusoo dambaabtay inay xambaarto (danbi naf kale) lagama xambaaro waxba haba noqoto qaraabanee, waxaad uun u digi kuwa ka yaabi Alle iyagoo maqan, oo ooga salaadda, ruuxii isdaahiriyana wuxuu uun isudaahiriyay naftiisa, xagga Alle unbaana loo ahaan (geeri dabadeed).

۞ يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ أَنتُمُ ٱلْفُقَرَآءُ إِلَى ٱللَّهِ ۖ وَٱللَّهُ هُوَ ٱلْغَنِىُّ ٱلْحَمِيدُ ﴿١٥﴾

إِن يَشَأْ يُذْهِبْكُمْ وَيَأْتِ بِخَلْقٍ جَدِيدٍ ﴿١٦﴾

وَمَا ذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ بِعَزِيزٍ ﴿١٧﴾

وَلَا تَزِرُ وَازِرَةٌ وِزْرَ أُخْرَىٰ ۚ وَإِن تَدْعُ مُثْقَلَةٌ إِلَىٰ حِمْلِهَا لَا يُحْمَلْ مِنْهُ شَىْءٌ وَلَوْ كَانَ ذَا قُرْبَىٰ ۗ إِنَّمَا تُنذِرُ ٱلَّذِينَ يَخْشَوْنَ رَبَّهُم بِٱلْغَيْبِ وَأَقَامُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ ۚ وَمَن تَزَكَّىٰ فَإِنَّمَا يَتَزَكَّىٰ لِنَفْسِهِۦ ۚ وَإِلَى ٱللَّهِ ٱلْمَصِيرُ ﴿١٨﴾

Alle waa hodan waana ka kaaftoomaa addoommadiisa, iyaguse waa fuqoro u baahan Alle had iyo jeerba, wuxuuna karaa Alle inuu halaago ciddii uu doono kuna bedalo cid kale, wax Alle dhib ku ahna ma aha, tan kale nafu naf kale danbigeed ma qaaddo, ee naf walba waxay kasbatay uunbaa horyaalla, qaraabonnimana danbi lays kagama qaado, waxayse waanadu anfacdaa kuwa Alle ka yaaba iyagoon arkayn, oo salaadda ku dadaala, oo xumaan iska daahiriya, dadkuna xagga Alle unbuu u ahaan, Cikrime wuxuu yidhi: maalinta qiyaame darisku dariskuu ku dhagi, qaraabaduna way isku dhagi ruuxna ruuxa kale wax uma taro Alle idamkii mooyee. **[Faadhir: 15-18].**

19. Ma eka indhoole iyo wax arke.

20. Mana eka mugdiyo iyo iftiin.

وَمَا يَسْتَوِى ٱلْأَعْمَىٰ وَٱلْبَصِيرُ ﴿١٩﴾

وَلَا ٱلظُّلُمَٰتُ وَلَا ٱلنُّورُ ﴿٢٠﴾

وَلَا ٱلظِّلُّ وَلَا ٱلْحَرُورُ ﴿٢١﴾

21. Mana eka hoos iyo kulayl.

وَمَا يَسْتَوِى ٱلْأَحْيَآءُ وَلَا ٱلْأَمْوَٰتُ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ يُسْمِعُ مَن يَشَآءُ ۖ وَمَآ أَنتَ بِمُسْمِعٍ مَّن فِى ٱلْقُبُورِ ﴿٢٢﴾

22. Mana eka kuwa nool iyo kuwo dhintay, Alle na wuxuu wax maqashiiyaa cidduu doono, mase maqashiin kartid cid qubuur ku sugan (gaaladuna waa wax dhintay oo kale).

إِنْ أَنتَ إِلَّا نَذِيرٌ ﴿٢٣﴾

23. Waxaan u dige ahayn ma tihid.

إِنَّآ أَرْسَلْنَٰكَ بِٱلْحَقِّ بَشِيرًا وَنَذِيرًا ۚ وَإِن مِّنْ أُمَّةٍ إِلَّا خَلَا فِيهَا نَذِيرٌ ﴿٢٤﴾

24. Annagaa kugu dirray xaq adoo bishaarayn oo digi, ummad aan u dige loo dirinna ma jirto.

وَإِن يُكَذِّبُوكَ فَقَدْ كَذَّبَ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ جَآءَتْهُمْ رُسُلُهُم بِٱلْبَيِّنَٰتِ وَبِٱلزُّبُرِ وَبِٱلْكِتَٰبِ ٱلْمُنِيرِ ﴿٢٥﴾

25. Hadday gaaladu ku beeniyaan waxaa wax beeniyay kuwii ka horreeyay, waxay ula timid rasuulladoodii xujooyin iyo kutub (waano) oo xukun leh.

ثُمَّ أَخَذْتُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ ۖ فَكَيْفَ كَانَ نَكِيرِ ﴿٢٦﴾

26. Markaasaan qabtay kuwii gaaloobay, sayse noqotay ciqaabtaydii (aan ciqaabay kuwaas).

Alleheen sarreeye wuxuu inoogu caddeeyay tusaale inayna ekeyn indhoole iyo wax arke, mugdi iyo nuur, ruux dhintay iyo ruux nool. Saasoo kale ma sinna mu'miniinta iyo gaaladu, Alle na cidduu doono oo xaqa jecel yuu wax maqashiiyaa, gaalase quluubtoodu dhimatay wax lama maqashiin karo Nabigana waa uun dige sidii rasuulladii ka horreeyay ee la beeniyay, Alle na ummad qudha kuma dayn jaahilnimo ee cid kasta waxaa loo diray wax u diga oo xaqa u caddeeya oo kutub waano iyo wanaag leh loo soo dhiibay kuwii beeniyayna waa la halligay. **[Faadhir: 19-26].**

أَلَمْ تَرَ أَنَّ ٱللَّهَ أَنزَلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَأَخْرَجْنَا بِهِۦ ثَمَرَٰتٍ مُّخْتَلِفًا أَلْوَٰنُهَا ۚ وَمِنَ ٱلْجِبَالِ جُدَدٌۢ بِيضٌ وَحُمْرٌ مُّخْتَلِفٌ أَلْوَٰنُهَا وَغَرَابِيبُ سُودٌ ﴿٢٧﴾

27. Miyaadan arkayn in Alle ka soo dajiyay samada biyo markaasna aan ku soo bixinnaa midho ay kala duwan yihiin midabkoodu, buurahana waxaa ka mid ah waddooyin cad cad, iyo kuwo

guduud ah oo midabbo kala duwan leh iyo kuwo madow daran ah.

وَمِنَ ٱلنَّاسِ وَٱلدَّوَآبِّ وَٱلْأَنْعَٰمِ مُخْتَلِفٌ أَلْوَٰنُهُۥ كَذَٰلِكَ ۗ إِنَّمَا يَخْشَى ٱللَّهَ مِنْ عِبَادِهِ ٱلْعُلَمَٰٓؤُا۟ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ عَزِيزٌ غَفُورٌ ﴿٢٨﴾

28. Dadka iyo dhulsocotada iyo xoolahaba waxaa ka mid ah midabbo kala duwan saas oo kale. Addoommada Alle, waxa uun Allahood ka baqa kuwa culimada ah, Ilaahna waa adkaade dhaafa.

إِنَّ ٱلَّذِينَ يَتْلُونَ كِتَٰبَ ٱللَّهِ وَأَقَامُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ وَأَنفَقُوا۟ مِمَّا رَزَقْنَٰهُمْ سِرًّا وَعَلَانِيَةً يَرْجُونَ تِجَٰرَةً لَّن تَبُورَ ﴿٢٩﴾

29. Kuwa akhriya kitaabka Alle oo salaadda ooga oo wax ka nafaqeeya (ka bixiya) waxaan ku arsaaqnay qarsoodi iyo caddaanba waxay rajayn tijaaro (ganacsi) aan baaraynin.

لِيُوَفِّيَهُمْ أُجُورَهُمْ وَيَزِيدَهُم مِّن فَضْلِهِۦٓ ۚ إِنَّهُۥ غَفُورٌ شَكُورٌ ﴿٣٠﴾

30. Si Alle ugu oofiyo ajrigooda uguna siyaadiyo fadligiisa, illeen Alle waa dambi dhaafe mahad badane.

Alle sarreeye wuxuu ku baraarujin qudradiisa iyo waynida awooddiisa uu abuurayna waxyaalo ku kala duwan midabka sida midhaha oo haddana ku soo baxay biyo kaliya, sidoo kale buuraha kala duwan, iyo dadka, xoolaha iyo naflayda kalaba, waxaana arrintaas u dhug yeelan oo ku waano qaadan culimada Alle ka cabsada, waxaa kale oo Alle ka warramay in addoommadiisa rumeeyay ay yihiin kuwa akhriya kitaabka Alle (quraanka) kuna camal fala wuxuu fari salaaddana ooga waxna bixiya hoos iyo korba, waxayna rajayn kuwaasi ganacsi khayr leh oon baaraynin, Alle na wuxuu u oofin ajrigooda wuxuuna u kordhin fadligiisa. Qataade wuxuu yidhi: Mudarif wuxuu ahaa Alle ha u naxariistee markuu akhriyo aayaddan kii dhaha: aayadani waa aayadda qurraa'da. **[Faadhir: 27-30].**

وَٱلَّذِىٓ أَوْحَيْنَآ إِلَيْكَ مِنَ ٱلْكِتَٰبِ هُوَ ٱلْحَقُّ مُصَدِّقًا لِّمَا بَيْنَ يَدَيْهِ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ بِعِبَادِهِۦ لَخَبِيرٌۢ بَصِيرٌ ﴿٣١﴾

31. Kaan kuu waxyoonnay ee quraanka ah, unbaa xaq ah wixii ka horreeyayna u rumayn, Alle na addoommadiisa waa ogyahay, arkaana.

ثُمَّ أَوۡرَثۡنَا ٱلۡكِتَٰبَ ٱلَّذِينَ ٱصۡطَفَيۡنَا مِنۡ عِبَادِنَاۖ فَمِنۡهُمۡ ظَالِمٞ لِّنَفۡسِهِۦ وَمِنۡهُم مُّقۡتَصِدٞ وَمِنۡهُمۡ سَابِقُۢ بِٱلۡخَيۡرَٰتِ بِإِذۡنِ ٱللَّهِۚ ذَٰلِكَ هُوَ ٱلۡفَضۡلُ ٱلۡكَبِيرُ ٣٢

32. Markaasaan dhaxalsiinnay kitaabka kuwaan doorannay oo addoommadannada ka mid ah, waxaase ka mid ah mid dulmiyay naftiisa, iyo mid dhexdhexaystay, iyo mid u hormaray khayrka idanka Alle, arrintaasna waa fadli weyn.

جَنَّٰتُ عَدۡنٖ يَدۡخُلُونَهَا يُحَلَّوۡنَ فِيهَا مِنۡ أَسَاوِرَ مِن ذَهَبٖ وَلُؤۡلُؤٗاۖ وَلِبَاسُهُمۡ فِيهَا حَرِيرٞ ٣٣

33. Jannada cadnin yeyna gali iyagoo loogu xidhi dhexdeeda jijimo (wax lagu xarragoodo) oo dahab iyo jawharba leh, dhar kooduna dhexdeeda waa xariir.

وَقَالُواْ ٱلۡحَمۡدُ لِلَّهِ ٱلَّذِيٓ أَذۡهَبَ عَنَّا ٱلۡحَزَنَۖ إِنَّ رَبَّنَا لَغَفُورٞ شَكُورٌ ٣٤

34. Waxayna dhihi waxaa mahad leh Alleha naga tagsiiyay walbahaarka, illeen Alleheen waa danbi dhaaf badane mahad badane.

ٱلَّذِيٓ أَحَلَّنَا دَارَ ٱلۡمُقَامَةِ مِن فَضۡلِهِۦ لَا يَمَسُّنَا فِيهَا نَصَبٞ وَلَا يَمَسُّنَا فِيهَا لُغُوبٞ ٣٥

35. Allihii na dajiyay guri nagaadi fadligiisa dartiis (janno) nagumana taabto dhexdeeda dhib, nagumana taabto daal.

Quraanka Alle ayaa u waxyooday Nabiga Maxamed ah (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) waana xaq sugan oo u rumayn wixii xaqa ahaa ee ka horreeyay, waxaana dhaxal u helay kitaabkaas addoommada Alle kooda yar dambaabay, kooda dhexdhaxaystay iyo kooda khayrka u hormaray, arrintaasuna waa deeq Alle oo wayn, waxayna gali dhammaantood jannooyin lagu nagaado ooy ku dhex xidhan dhar sharaf leh ooy Alle ku mahdin, walbahaarna uu ka dheereeyay dajiyayna guri aan dhib iyo daal midna lahayn (jannada), Dabaraani wuxuu ka wariyay Ibnu Cumar inuu ka weriyay Rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): ruuxa ashahaata kuma cidloobo geerida, qabriga iyo soo bixinta midna, waana xadiith taag daran **[Faadhir: 31-35].**

وَٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لَهُمۡ نَارُ جَهَنَّمَ لَا يُقۡضَىٰ عَلَيۡهِمۡ فَيَمُوتُواْ وَلَا يُخَفَّفُ

36. Kuwii gaaloobay waxay mudan naarta jahannamo, laguma xukumo geeri oy

dhintaan, lagamana fududeeyo cadaabkeeda, saasaanna ku abaal marinnaa mid kastoo gaalnimo badan.

عَنْهُم مِّنْ عَذَابِهَا ۚ كَذَٰلِكَ نَجْزِى كُلَّ كَفُورٍ ﴿٣٦﴾

37. Waxay ku qaylyi dhexdeeda Rabbigeenow naga bixi aan camal fiican oo kaan sameyn jirray ka duwan fallee, miyaannaan idin cimri siin muddo uu wax ku xusuusto ruuxii wax xuusuusan oosan idiin imaannin dige (Nabiga) ee dhadhamiya gaaloy (ciqaabta) uma sugnaannin daalimiin gargaaree.

وَهُمْ يَصْطَرِخُونَ فِيهَا رَبَّنَآ أَخْرِجْنَا نَعْمَلْ صَٰلِحًا غَيْرَ ٱلَّذِى كُنَّا نَعْمَلُ ۚ أَوَلَمْ نُعَمِّرْكُم مَّا يَتَذَكَّرُ فِيهِ مَن تَذَكَّرَ وَجَآءَكُمُ ٱلنَّذِيرُ ۖ فَذُوقُوا۟ فَمَا لِلظَّٰلِمِينَ مِن نَّصِيرٍ ﴿٣٧﴾

38. Alle wuxuu ogyahay waxa ku maqan samooyinka iyo dhulka, wuxuuna ogyahay waxa laabta (qalbiga) ku sugan.

إِنَّ ٱللَّهَ عَٰلِمُ غَيْبِ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ إِنَّهُۥ عَلِيمٌۢ بِذَاتِ ٱلصُّدُورِ ﴿٣٨﴾

39. Alle waa kan idinka dhigay kuwo dhulka iska badala, ruuxii gaaloobase gaalnimadiisu isagay dhibi, gaaladana uma kordhiso gaalnimadoodu Rabbigood agtiisa cadho mooyee, umana kordhiso gaalada gaalnimadu khasaaro mooyee.

هُوَ ٱلَّذِى جَعَلَكُمْ خَلَٰٓئِفَ فِى ٱلْأَرْضِ ۚ فَمَن كَفَرَ فَعَلَيْهِ كُفْرُهُۥ ۖ وَلَا يَزِيدُ ٱلْكَٰفِرِينَ كُفْرُهُمْ عِندَ رَبِّهِمْ إِلَّا مَقْتًا ۖ وَلَا يَزِيدُ ٱلْكَٰفِرِينَ كُفْرُهُمْ إِلَّا خَسَارًا ﴿٣٩﴾

Had iyo jeer quraanku wuxuu isla xidhiidhiyaa xaalka kuwa wanaagga fala iyo kuwa xumaanta sameeya, iyo waxa mid kasta loo darbay, aayadahanna waxay sheegi inay gaalo u sugnaatay naar ayan ka dhimanayn lagana fududaynayn, waana abaalka gaallima badane oo dhan, qaylo iyo Rabbiyow naarta naga bixi aan wanaag falnee wax ma tarto markaas oo kale, maxaa yeelay cimri wax lagu xusuusto waa la siiiyay u digana wuu u yimid, Alle na wax walba waa ogyahay isagaana dhulka ku kala badala dadka, gaallimo iyo xumaanna waxaan cadho Alle iyo khasaare ahayn ma kordhiso, wuxuu yidhi Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): Alle waa u dhammeeyay cudurdaar ruuxuu dib u dhigay intuu ka gaadho lixdan sano. Waxaa wariyay Bukhaari. **[Faadhir: 36-39].**

40. Ka warrama shariigyada aad baryeysaan ood (caabudaysaan) Alle ka sokow, i tusiya waxay abuureen dhulka, ama wadaag ah oy ku leeyihiin samooyinka, mise waxaan siinnay kitaab oo ay xujeeysan, saas ma aha ee gaalada qaarkood qaar uma yabooho waaxaan kedo ahayn.

قُلْ أَرَءَيْتُمْ شُرَكَآءَكُمُ ٱلَّذِينَ تَدْعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ أَرُونِى مَاذَا خَلَقُوا۟ مِنَ ٱلْأَرْضِ أَمْ لَهُمْ شِرْكٌ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ أَمْ ءَاتَيْنَٰهُمْ كِتَٰبًا فَهُمْ عَلَىٰ بَيِّنَتٍ مِّنْهُ ۚ بَلْ إِن يَعِدُ ٱلظَّٰلِمُونَ بَعْضُهُم بَعْضًا إِلَّا غُرُورًا ﴿٤٠﴾

41. Alle ayaa ka haya samooyinka iyo dhulka inay zuulaan (oo tagaan), hadday zuulaanna waxaan Alle ahayn oo qaban ma jiro, Alle na waa dulbadane dhaafid badan.

* إِنَّ ٱللَّهَ يُمْسِكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ أَن تَزُولَا ۚ وَلَئِن زَالَتَآ إِنْ أَمْسَكَهُمَا مِنْ أَحَدٍ مِّنۢ بَعْدِهِۦٓ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ حَلِيمًا غَفُورًا ﴿٤١﴾

42. Waxay ugu dhaarteen Alle dhaar adag hadduu u yimaado u dige inay noqdaan kuwa ka hanuunsan (ka toosan) ummadaha kale, markuu u yimid digihiina uma siyaadinnin waxaan carar ahayn.

وَأَقْسَمُوا۟ بِٱللَّهِ جَهْدَ أَيْمَٰنِهِمْ لَئِن جَآءَهُمْ نَذِيرٌ لَّيَكُونُنَّ أَهْدَىٰ مِنْ إِحْدَى ٱلْأُمَمِ ۖ فَلَمَّا جَآءَهُمْ نَذِيرٌ مَّا زَادَهُمْ إِلَّا نُفُورًا ﴿٤٢﴾

43. Isku kibrin dhulka iyo dhagar xun darteed, dhagarna xumaan waxaan ahayn ehelkiisa kuma dhaco ee miyaad sugaysaan waxaan waddadii kuwii hore ahayn, mana helaysid sunnada Alle wax badala, ma helaysid sunnada Alle wax wareejiya.

ٱسْتِكْبَارًا فِى ٱلْأَرْضِ وَمَكْرَ ٱلسَّيِّئِ ۚ وَلَا يَحِيقُ ٱلْمَكْرُ ٱلسَّيِّئُ إِلَّا بِأَهْلِهِۦ ۚ فَهَلْ يَنظُرُونَ إِلَّا سُنَّتَ ٱلْأَوَّلِينَ ۚ فَلَن تَجِدَ لِسُنَّتِ ٱللَّهِ تَبْدِيلًا ۖ وَلَن تَجِدَ لِسُنَّتِ ٱللَّهِ تَحْوِيلًا ﴿٤٣﴾

Gaaladu ma keeni karaan wax xujo ah oo ku tusin toosnida waxay caabudi oo Alle ka soo hadhay, waxay sheegi ama caabudina waa been aan wax ka jirin waxaase xaq ah Allaha cirka iyo dhulka haya, sugayna, gaaladii qureesheedna in kastooy ku dhaaran jireen in haddii Nabi loo soo diro ay rumayn haddana markuu Nabigu xaqa ula yimid way beeniyeen isla wayni iyo dhagar darteed,

dhagarna ruuxeeday halaagtaa, taasina waa jidka Alle iyo sunnadiisa waxbadali kara ama leexin karana majiro. Waxaa sugnaatay in Rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) uu yidhi: Alle sarreeye ma seexdo mana habboona inuu seexdo, qaybna wuu ridaa midna wuu kor yeelaa, waxaana u kora camalka habeenka maalinta ka hor, ka maalintiina habeenka ka hor, waxaana ku xijaaban nuur (Bukhaari iyo Muslim). **[Faadhir: 40-43].**

أَوَلَمْ يَسِيرُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ فَيَنظُرُوا۟ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ وَكَانُوٓا۟ أَشَدَّ مِنْهُمْ قُوَّةً ۚ وَمَا كَانَ ٱللَّهُ لِيُعْجِزَهُۥ مِن شَىْءٍ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَلَا فِى ٱلْأَرْضِ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ عَلِيمًا قَدِيرًا ﴿٤٤﴾

44. Miyeyna ku soconnin dhulka ooyna dayeynin siday noqotay cidhibtii kuwii ka horreeyey gaaladii Makaad, waxay ahaayeen kuwo ka xoog badan, Alle na wax ku cajisiya (daaliya) ma jiro samooyinka iyo dhulka dhexdooda midna, waana oge wax walba kara.

وَلَوْ يُؤَاخِذُ ٱللَّهُ ٱلنَّاسَ بِمَا كَسَبُوا۟ مَا تَرَكَ عَلَىٰ ظَهْرِهَا مِن دَآبَّةٍ وَلَٰكِن يُؤَخِّرُهُمْ إِلَىٰٓ أَجَلٍ مُّسَمًّى ۖ فَإِذَا جَآءَ أَجَلُهُمْ فَإِنَّ ٱللَّهَ كَانَ بِعِبَادِهِۦ بَصِيرًۢا ﴿٤٥﴾

45. Hadduu Alle u qaban dadka waxay kasbadeen (oo xumaan ah) kagama tageen dhulka korkiisa wax socda, laakiin wuxuu dib ugu dhigi tan iyo muddo magacaaban, marka ajashoodu (geeridoodu) timaadana Alle addoommadiisa wuu arkaa.

Waxaa habboon in lagu waano qaato maridda dhulka, si loo ogaado kuwii beeniyay Nabiyada iyo xaqii iyo siduu Alle ku falay, cidhibtoodiina noqotay halaag iyagoo xoog, xoolo, carruur iyo tiraba is bidayay, waxaasina wax ugama tarin cadaabkii Alle iyo ciqaabtiisii midna, Alle na waa dul badane, hadduu sida loo dambaabi wax u ciqaabana waxba kuma reebeen dhulka korkiisa wuxuuse la sugi xisaabta iyo abaal marinta muddo iyo maalinta qiyaame, ee ruux walba la kulmi abaalkiisa wax Alle ka qarsoonna uusan jirin. **[Faadhir: 44-45].**

Suurat yaasiin

سُورَةُ يٰسٓ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxay ku tusin mucjisada quraanka.

يٰسٓ ﴿١﴾

2. Quraanka xigmada leh yaan ku dhaartaye.

وَٱلْقُرْءَانِ ٱلْحَكِيمِ ﴿٢﴾

3. Nabiyoow waxaad ka mid tahay kuwa la diray (rasuullada).

إِنَّكَ لَمِنَ ٱلْمُرْسَلِينَ ﴿٣﴾

4. Jid toosanna waad ku sugan tahay.

عَلَىٰ صِرَٰطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿٤﴾

5. Quraankuna waa soo dajinta Allaha adkaada ee naxariista.

تَنزِيلَ ٱلْعَزِيزِ ٱلرَّحِيمِ ﴿٥﴾

6. Inaad ugu digto qoom aan loo digin aabayaalkood oo halmaansan.

لِتُنذِرَ قَوْمًا مَّآ أُنذِرَ ءَابَآؤُهُمْ فَهُمْ غَٰفِلُونَ ﴿٦﴾

7. Dhab ahaanna waxaa ugu waajibay badankooda (ciqaab) mana rumeeyaan xaqa.

لَقَدْ حَقَّ ٱلْقَوْلُ عَلَىٰٓ أَكْثَرِهِمْ فَهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٧﴾

Alle wuxuu ku dhaartay quraanka xakiimka ah in Nabiga laga soo diray xagga Alle loona waxyooday xaqa, jid toosanna uu ku sugan yahay, si quraanka Alle ku soo dajiyay uu u gaadhsiiyo dadka iyo gaaladii aan wax xaqa u sheega loo bixinin dhawaanahan, badankoodna halaagsameen naaruna u waajibtay kuna dhiman gaalnimo Alle na ma dhuminnin ee iyagaa madax adaygay xaqana diiday. **[Yaasiin: 1-7].**

8. Annagaa yeellay cunahooda bir waxayna qaban tan iyo gadhka madaxayna kor u taagi (dhibaato darteed).

إِنَّا جَعَلْنَا فِىٓ أَعْنَٰقِهِمْ أَغْلَٰلًا فَهِىَ إِلَى ٱلْأَذْقَانِ فَهُم مُّقْمَحُونَ ﴿٨﴾

وَجَعَلْنَا مِنۢ بَيْنِ أَيْدِيهِمْ سَدًّا وَمِنْ خَلْفِهِمْ سَدًّا فَأَغْشَيْنَٰهُمْ فَهُمْ لَا يُبْصِرُونَ ﴿٩﴾

9. Waxaanna yeellay hortooda jidaar gadaashoodana jidaar waana indha tirnay waxna ma arkaan.

وَسَوَآءٌ عَلَيْهِمْ ءَأَنذَرْتَهُمْ أَمْ لَمْ تُنذِرْهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿١٠﴾

10. Waxaa isku mid ah haddaad digto iyo hadaadan u digin (marna) ma rumeeyaan.

إِنَّمَا تُنذِرُ مَنِ ٱتَّبَعَ ٱلذِّكْرَ وَخَشِىَ ٱلرَّحْمَٰنَ بِٱلْغَيْبِ ۖ فَبَشِّرْهُ بِمَغْفِرَةٍ وَأَجْرٍ كَرِيمٍ ﴿١١﴾

11. Waxaad uun u digi (ooy anfici digiddu) ruuxii raaca quraanka oo Alle ka yaaba isagoon arkayn, uguna bishaaree dambi dhaaf iyo ajir wanaagsan.

إِنَّا نَحْنُ نُحْىِ ٱلْمَوْتَىٰ وَنَكْتُبُ مَا قَدَّمُوا۟ وَءَاثَٰرَهُمْ ۚ وَكُلَّ شَىْءٍ أَحْصَيْنَٰهُ فِىٓ إِمَامٍ مُّبِينٍ ﴿١٢﴾

12. Annagaa nooleyna wixii dhintay, waana qornaa waxay hor marsadeen iyo raadkoodiiba (wixii looga dayanaayey), wax walbana waxaan ku koobnay kitaab muuqda (looxul maxfuudka).

Xaq diidayaashu ma doonayaan hanuunka Alle, waxayna la mid yihiin ruux luquntiisa iyo gacmihiisa laysku xidhay oo madaxa kor u taagi, ama darbi lagu dayray, ama indhihiisa la daboolay, haddii wax loo sheego iyo haddii kalana waa isku mid oo xaqa ma rabaan, waanadana waxaa ku intifaaci ruuxii quraanka raaci oo Alle ka yaabi, wuxuuna Alle ugu bishaareeyay kuwaas dambi dhaaf iyo ajri wayn, maxaa yeelay Allaha awoodda leh yey ka yaabeen iyagoon arkeynin, Allahaas waxna nooleeya wax kastana kitaab ku kulmiya. Nabiguna wuxuu yidhi: ibnu aadanku hadduu dhinto wuu go'aa camalkiisu saddex mooyee: cilmi lagu intifaaco, ilmo fiican oo u duceeya, iyo sadaqo socota gadaashiis. Waxaa wariyay Muslim. **[Yaasiin: 8-12].**

وَٱضْرِبْ لَهُم مَّثَلًا أَصْحَٰبَ ٱلْقَرْيَةِ إِذْ جَآءَهَا ٱلْمُرْسَلُونَ ﴿١٣﴾

13. Uga yeel tusaale asaxaabtii magaaladii markay u yimaadeen rasuulladii (loo soo diray).

إِذْ أَرْسَلْنَآ إِلَيْهِمُ ٱثْنَيْنِ فَكَذَّبُوهُمَا فَعَزَّزْنَا بِثَالِثٍ فَقَالُوٓاْ إِنَّآ إِلَيْكُم مُّرْسَلُونَ ﴿١٤﴾

14. Markaan u dirnay xaggooda labo, ooy beeniyeen, markaas aan ku xoojinnay mid saddexaad, oy dhaheen idinkaa naloo kiin soo diray.

قَالُواْ مَآ أَنتُمْ إِلَّا بَشَرٌ مِّثْلُنَا وَمَآ أَنزَلَ ٱلرَّحْمَٰنُ مِن شَىْءٍ إِنْ أَنتُمْ إِلَّا تَكْذِبُونَ ﴿١٥﴾

15. Waxayna dhaheen (gaaladii) idinku ma tihidiin waxaan bashar (dad) nala mid ah ahayn, Allaha Raxmaan ahna waxba ma soo dajinnin, idinkuna waxaan been ahayn ma sheegaysaan.

قَالُواْ رَبُّنَا يَعْلَمُ إِنَّآ إِلَيْكُمْ لَمُرْسَلُونَ ﴿١٦﴾

16. Waxay dhaheen (rasuuladii) Rabbigeen ayaa og in naloo kiin soo diray.

وَمَا عَلَيْنَآ إِلَّا ٱلْبَلَٰغُ ٱلْمُبِينُ ﴿١٧﴾

17. Korkannagana ma aha waxaan gaadhsiin cad ahayn.

قَالُوٓاْ إِنَّا تَطَيَّرْنَا بِكُمْ ۖ لَئِن لَّمْ تَنتَهُواْ لَنَرْجُمَنَّكُمْ وَلَيَمَسَّنَّكُم مِّنَّا عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١٨﴾

18. Waxay dhaheen (gaaladii) waan idin baasaysannay, haddaydaan joogin waan idin dhagaxyeynaynaa, waxaana xaggannaga idinka taaban cadaab daran.

قَالُواْ طَٰٓئِرُكُم مَّعَكُمْ ۚ أَئِن ذُكِّرْتُم ۚ بَلْ أَنتُمْ قَوْمٌ مُّسْرِفُونَ ﴿١٩﴾

19. Waxay dhaheen rasuulladii baaskiinnu wuu idinla joogi, mahaddii laydin waaniyo (ayaad na baaseysanaysaan), waxaadse tihiin qoon xadgudbay.

Gaaladii Nabiga beenisay wax badan yuu Alle tusaale u sameeyay, halkanna wuxuu ka qisooday magaalo ummadihii hore ah oo Alle u soo diray rasuullo laba ah, markii la beeniyeyna mid saddexaad lagu xoojiyay, hase yeeshee ay wada beeniyeen iyagoo sheegay inaan Alle wax ku soo dajinin, rasuulladuna ay ku dhaheen Alle ayaa og in naloo kiin soo diray waxaana digniin iyo gaadhsiin cad ahayna nama saarra, Ibnu Cabaas waxaa laga weriyay inay ahayd magaaladaasu Andaakiya oo gaal xukumi jiray. **[Yaasiin: 13-19].**

وَجَآءَ مِنْ أَقْصَا ٱلْمَدِينَةِ رَجُلٌ يَسْعَىٰ قَالَ يَٰقَوْمِ ٱتَّبِعُوا۟ ٱلْمُرْسَلِينَ ﴿٢٠﴾

20. Waxaa ka yimid magaalada dhankeeda fog nin dagdagi (ordi) wuxuuna ku yidhi qoomkayow raaca rasuullada.

ٱتَّبِعُوا۟ مَن لَّا يَسْـَٔلُكُمْ أَجْرًا وَهُم مُّهْتَدُونَ ﴿٢١﴾

21. Raaca cid aan idin warsanayn ujuuro, oo hanuunsan.

وَمَا لِىَ لَآ أَعْبُدُ ٱلَّذِى فَطَرَنِى وَإِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿٢٢﴾

22. Maxaanan u caabudaynin Allihii i abuuray xaggiisana laydiin celin.

ءَأَتَّخِذُ مِن دُونِهِۦٓ ءَالِهَةً إِن يُرِدْنِ ٱلرَّحْمَٰنُ بِضُرٍّ لَّا تُغْنِ عَنِّى شَفَٰعَتُهُمْ شَيْـًٔا وَلَا يُنقِذُونِ ﴿٢٣﴾

23. Miyaan ka yeelan wax ka soo hadhay ilaahyo hadduu Allaha Raxmaan ah dhib ila doono ayan wax ii tareyn shafeecadoodu waxba ayan i korinayn.

إِنِّىٓ إِذًا لَّفِى ضَلَٰلٍ مُّبِينٍ ﴿٢٤﴾

24. Markaas waxaan ku sugnaan baadi muuqata (cad).

إِنِّىٓ ءَامَنتُ بِرَبِّكُمْ فَٱسْمَعُونِ ﴿٢٥﴾

25. Anigu waxaan rumeeyay Allehiin ee maqla.

قِيلَ ٱدْخُلِ ٱلْجَنَّةَ ۖ قَالَ يَٰلَيْتَ قَوْمِى يَعْلَمُونَ ﴿٢٦﴾

26. Waxaa lagu yidhi gal jannada wuxuuna yidhi shallaytadaydee qoomkaygii muu ogaado.

بِمَا غَفَرَ لِى رَبِّى وَجَعَلَنِى مِنَ ٱلْمُكْرَمِينَ ﴿٢٧﴾

27. Waxa Alle iigu dambi dhaafay iigana yeelay kuwo la karaameeyey (inay ahayd iimankaygi iyo sabarkeygi).

* وَمَآ أَنزَلْنَا عَلَىٰ قَوْمِهِۦ مِنۢ بَعْدِهِۦ مِن جُندٍ مِّنَ ٱلسَّمَآءِ وَمَا كُنَّا مُنزِلِينَ ﴿٢٨﴾

28. Kuma aannaan dajinnin qoomkiisii, gadaashiis, junuud samada ka timid, mana aannaan ahayn kuwo ku soo dajiya (ciidan kuwa la halaagi).

إِن كَانَتْ إِلَّا صَيْحَةً وَٰحِدَةً فَإِذَا هُمْ خَٰمِدُونَ ﴿٢٩﴾

29. Waxaan qaylo kaliya ahaynna laguma halaagin oo markaas ay bakhtiyeen (halaagsameen).

Had iyo jeer markii la arko dad xun waxaa la arkaa oo kale dad wanaagsan sida ninka xaqa rumeeyay ee aayadahani ka warrami iskuna dayay inuu hanuuniyo qoomkiisii, isagoo u sheegi in Alle kaliya muto in la caabudo, waxa ka soo hadhayna ayna wax la caabudo ahayn iyo kuwo wax tari midna, markuu xaalkii ku adkeeyayna ay dileen, markaas Alle janno ugu abaalguday, isna markaas uu bishaaraystay isagoo dhihi may ogaadaan qoomkaygii sida Alle ii wanaajiyay iigana mid dhigay kuwa la sharrifay, kadibna xaalkii wuxuu ku dambeeyay in la halaagay gaaladii. Taasina waa abaalka xaqdiidayaasha. Qataade wuxuu yidhi: halla kulmin mu'min adoon u nasteexaynaynin oo khayaani. **[Yaasiin: 20-29].**

يَٰحَسۡرَةً عَلَى ٱلۡعِبَادِۚ مَا يَأۡتِيهِم مِّن رَّسُولٍ إِلَّا كَانُواْ بِهِۦ يَسۡتَهۡزِءُونَ ﴿٣٠﴾

30. Nidaamo (qoomammo) yaa u sugnaatay addoommada, rasuulkii u yimaadaba waxay ahaadaan kuwo ku jees jeesa.

أَلَمۡ يَرَوۡاْ كَمۡ أَهۡلَكۡنَا قَبۡلَهُم مِّنَ ٱلۡقُرُونِ أَنَّهُمۡ إِلَيۡهِمۡ لَا يَرۡجِعُونَ ﴿٣١﴾

31. Miyayna arkeyn intaan halaagnay hortood quruumo, aan xaggooda u soo noqonayn.

وَإِن كُلٌّ لَّمَّا جَمِيعٌ لَّدَيۡنَا مُحۡضَرُونَ ﴿٣٢﴾

32. Dhammaanna waxaa lagu soo kulmin agtannada.

وَءَايَةٌ لَّهُمُ ٱلۡأَرۡضُ ٱلۡمَيۡتَةُ أَحۡيَيۡنَٰهَا وَأَخۡرَجۡنَا مِنۡهَا حَبّٗا فَمِنۡهُ يَأۡكُلُونَ ﴿٣٣﴾

33. Waxaa calaamo u ah dhulka dhinta (abaarooba) oo noolayno kana soo bixinno midho ay wax ka cunaan.

وَجَعَلۡنَا فِيهَا جَنَّٰتٖ مِّن نَّخِيلٖ وَأَعۡنَٰبٖ وَفَجَّرۡنَا فِيهَا مِنَ ٱلۡعُيُونِ ﴿٣٤﴾

34. Waxaanna yeellay dhexdeeda beero timir iyo cinabyo ah, waxaanna ka dillaacinay dhexdeeda ilo (biyo ah).

لِيَأۡكُلُواْ مِن ثَمَرِهِۦ وَمَا عَمِلَتۡهُ أَيۡدِيهِمۡۖ أَفَلَا يَشۡكُرُونَ ﴿٣٥﴾

35. Si ay u cunaan midhihiisa iyo waxay camal faleen gacmahoodu, miyeyna mahdinaynin Alle.

سُبۡحَٰنَ ٱلَّذِي خَلَقَ ٱلۡأَزۡوَٰجَ كُلَّهَا مِمَّا تُنۢبِتُ ٱلۡأَرۡضُ وَمِنۡ أَنفُسِهِمۡ وَمِمَّا لَا يَعۡلَمُونَ ﴿٣٦﴾

36. Waxaana nasahan Allaha abuuray noocyada dhamaanteed oo ah waxa dhulku soo dhaliyo iyo naftoodaba iyo wax ayna ogayn.

Dadka waxaa ku badan kuwo khasaaray oo xumaan iyo xaq beenin ku madax taaga Alle na in kastoo uu dul badan yahay hadana daalimiinta wuu halaagaa, isagoo ruux walba la hor gayn Allehiis, ciddii waantoobina waxaa waano ugu filan dhulka abaarooba ee Alle roobka ku shubo ka dibna midho, doog iyo khayr badan ka soo baxo, waxaana xumaan ka fog Allaha abuuray noocyada dhammaantood. **[Yaasiin: 30-36].**

وَءَايَةٌ لَّهُمُ ٱلَّيۡلُ نَسۡلَخُ مِنۡهُ ٱلنَّهَارَ فَإِذَا هُم مُّظۡلِمُونَ ﴿٣٧﴾

37. Waxaa dadka calaamo ugu filan habeenkaan maalinta ka soo siibno, oo markaas ay mugdi galaan dadkii.

وَٱلشَّمۡسُ تَجۡرِي لِمُسۡتَقَرّٖ لَّهَاۚ ذَٰلِكَ تَقۡدِيرُ ٱلۡعَزِيزِ ٱلۡعَلِيمِ ﴿٣٨﴾

38. Qorraxduna waxay ku oroddaa meelay leedahay, taasina waa qadaraadda Allaha adkaada ee waxwalba og.

وَٱلۡقَمَرَ قَدَّرۡنَٰهُ مَنَازِلَ حَتَّىٰ عَادَ كَٱلۡعُرۡجُونِ ٱلۡقَدِيمِ ﴿٣٩﴾

39. Dayaxana waxaan u qadarnay (u yeelnay) meelo uu ku hoydo intuu ka noqdo sida laan gabowday oo kale.

لَا ٱلشَّمۡسُ يَنۢبَغِي لَهَآ أَن تُدۡرِكَ ٱلۡقَمَرَ وَلَا ٱلَّيۡلُ سَابِقُ ٱلنَّهَارِۚ وَكُلّٞ فِي فَلَكٖ يَسۡبَحُونَ ﴿٤٠﴾

40. Qorraxdana uma suurowdo inay haleesho dayaxa habeenkana uma suuroowdo inuu maalinta ka hormaro, mid kastana falaggiisuu dhex dabaalan.

وَءَايَةٞ لَّهُمۡ أَنَّا حَمَلۡنَا ذُرِّيَّتَهُمۡ فِي ٱلۡفُلۡكِ ٱلۡمَشۡحُونِ ﴿٤١﴾

41. Waxaa calaamo ugu filan dadka inaan ku xambaarray aabayalkood doontii buuxday.

وَخَلَقۡنَا لَهُم مِّن مِّثۡلِهِۦ مَا يَرۡكَبُونَ ﴿٤٢﴾

42. Waxaanna uga abuuraynaa iyada oo kale waxay koraan.

وَإِن نَّشَأۡ نُغۡرِقۡهُمۡ فَلَا صَرِيخَ لَهُمۡ وَلَا هُمۡ يُنقَذُونَ ﴿٤٣﴾

43. Haddaan doonnana waan maansheynaa wax u gargaarana ma helaan lamana koriyo.

إِلَّا رَحۡمَةٗ مِّنَّا وَمَتَٰعًا إِلَىٰ حِينٖ ﴿٤٤﴾

44. Naxariis Alle iyo u raaxayn tan iyo wakhti mooyee.

Runtu waa in habeenka, maalinta, qorraxda, dayaxa iyo khalqiga kalaba yihiin calaamooyinka ku tusin jiridda Alle iyo awooddiisa, mid walbana wuxuu u shaqeeyaa sidii Alle ugu talo galay, mid kan kale dhaafi ama haleelina ma jiro, wuxuuna mid walbana dhex dabaalan falaggiisa, waxaa kale oo calaama u ah Alle awoodiisa siduu badda u sakhiray si doomuhu iyo maraakiibtu u dhex socdaan, haduu Alle doonana uu karo inuu maasheeyo kuna dajiyo badda, hasa yeeshee wax walba wakhti buu u yeelay. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: falaggu waa sida maxaarka dharka lugu tolo meesha wareegsan ee dunta looga wareejiyo ayuu falaggu u eg yahay. **[Yaasiin: 37-44].**

وَإِذَا قِيلَ لَهُمُ ٱتَّقُواْ مَا بَيۡنَ أَيۡدِيكُمۡ وَمَا خَلۡفَكُمۡ لَعَلَّكُمۡ تُرۡحَمُونَ ﴿٤٥﴾

45. Marka gaalada lagu dhaho ka dhowrsada waxa hortiinna ah iyo waxa gadaashiinna ah waxaad u dhawdihiin in laydiin naxariistee (ma maqlaan).

وَمَا تَأۡتِيهِم مِّنۡ ءَايَةٖ مِّنۡ ءَايَٰتِ رَبِّهِمۡ إِلَّا كَانُواْ عَنۡهَا مُعۡرِضِينَ ﴿٤٦﴾

46. Aayad kasta oo u timaada oo ka mid ah aayaadka Rabbigood way ka jeedsadaan.

وَإِذَا قِيلَ لَهُمۡ أَنفِقُواْ مِمَّا رَزَقَكُمُ ٱللَّهُ قَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لِلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ أَنُطۡعِمُ مَن لَّوۡ يَشَآءُ ٱللَّهُ أَطۡعَمَهُۥٓ إِنۡ أَنتُمۡ إِلَّا فِي ضَلَٰلٖ مُّبِينٖ ﴿٤٧﴾

47. Marka lagu dhaho bixiya waxa Alle idinku arzuqay wax ka mid ah waxay ku dhahaan kuwa gaaloobay kuwii rumeeyay ma waxaan quudinaynaa cid hadduu doono Alle uu quudin lahaa, waxaan baadi cad ahayna kuma sugnidin.

وَيَقُولُونَ مَتَىٰ هَٰذَا ٱلۡوَعۡدُ إِن كُنتُمۡ صَٰدِقِينَ ﴿٤٨﴾

48. Waxay odhan gaaladu waa goorma (waqtiguu dhici) yaboohaas (qiyaamadu) haddaad run sheegaysaan.

مَا يَنظُرُونَ إِلَّا صَيۡحَةٗ وَٰحِدَةٗ تَأۡخُذُهُمۡ وَهُمۡ يَخِصِّمُونَ ﴿٤٩﴾

49. Ma sugaayaan (gaaladu) hal qaylo mooyee oo qabanaysa iyagoo doodi.

فَلَا يَسۡتَطِيعُونَ تَوۡصِيَةٗ وَلَآ إِلَىٰٓ أَهۡلِهِمۡ يَرۡجِعُونَ ﴿٥٠﴾

50. Mana karaan dardaaran ehelkoodiina uma soo noqdaan.

Ruuxa caqliga leh waa inuu u darbado in laga abaalmarin wax kastoo uu la yimaado, hase yeeshee gaalada caqliga daran iyo wixii la mid ahba waxba uma aabayeelaan marka arrintaas la farana dhag jalaq uma siiyaan, wax kastoo xaq ahna way ka jeedsadaan, waxa Alle ugu nicmeeyayna way ku bakhaylaan, waxayna ku jawaabaan xumaan, jeedsi iyo qiyaamo inkir, maxayse fali markay hal qaylo oo halaagta iyo geeridu u timaado iyagoo muran iyo dood ku jira, oo markaas aan dardaaran iyo ku noqosho guri midna u suuroobaynin. **[Yaasiin: 45-50].**

وَنُفِخَ فِي ٱلصُّورِ فَإِذَا هُم مِّنَ ٱلْأَجْدَاثِ إِلَىٰ رَبِّهِمْ يَنسِلُونَ ﴿٥١﴾

51. Suurkaa la afuufi markaasaa dadku qubuurahooda xagga Rabbigood uga soo dagdagi.

قَالُوا۟ يَٰوَيْلَنَا مَنۢ بَعَثَنَا مِن مَّرْقَدِنَا ۜ هَٰذَا مَا وَعَدَ ٱلرَّحْمَٰنُ وَصَدَقَ ٱلْمُرْسَلُونَ ﴿٥٢﴾

52. Iyagooy dhihi gaaladu waan khasaarnaye yaa naga soo bixiyey meeshaan jiifnay (qabrigii) taasina waa wixii Allaha Raxmaan ah yaboohay rasuulladuna ku run sheegeen.

إِن كَانَتْ إِلَّا صَيْحَةً وَٰحِدَةً فَإِذَا هُمْ جَمِيعٌ لَّدَيْنَا مُحْضَرُونَ ﴿٥٣﴾

53. Waxaan qaylo kaliyo ahayn ma aha, maarkaasaa dhammaantood agtannada lagu soo kulmin.

فَٱلْيَوْمَ لَا تُظْلَمُ نَفْسٌ شَيْـًٔا وَلَا تُجْزَوْنَ إِلَّا مَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٥٤﴾

54. Maantana (qiyaamada) lagama dulmiyo nafna waxba, laydin kana abaalmarin maayo waxaad camal falayseen mooyeen.

إِنَّ أَصْحَٰبَ ٱلْجَنَّةِ ٱلْيَوْمَ فِى شُغُلٍ فَٰكِهُونَ ﴿٥٥﴾

55. Asaxaabta jannada (ehelkeeda) maantaa waxay ku shuqloon yihiin nicmo iyo farax.

هُمْ وَأَزْوَٰجُهُمْ فِى ظِلَٰلٍ عَلَى ٱلْأَرَآئِكِ مُتَّكِـُٔونَ ﴿٥٦﴾

56. Iyaga iyo haweenkooduba waxay ku sugnaan hadh, waxayna ku dangiigsanaan sariiro (sare).

لَهُمْ فِيهَا فَٰكِهَةٌ وَلَهُم مَّا يَدَّعُونَ ﴿٥٧﴾

57. Waxayna dhexdeeda ka heli faakihad, waxayna heli waxay dalbaan.

58. Salaan Rabbiga naxariista xaggiisa ka timidna way heli.

سَلَٰمٌ قَوْلًا مِّن رَّبٍّ رَّحِيمٍ ﴿٥٨﴾

Qiyaamadu waa xaq sugan, wayna imaan, dadkuna qubuurahay ka soo bixi, iyadow kuwa xun dhihi shaleytee yaa naga soo bixiyey qabrigii aan jiifnay, waxaana loogu jawaabi waa waqtigii Alle yaboohay rasuulladuna ku run sheegeen, soo kulmintuna Alle kuma cusla ee hal qaylo oo malag ku qaylyo yaa ku filan, Alle na cidna ma dulmiyo, ruux walbana waxaa laga abaal marin wuxuu camal fashay, ehelo jannahana waxay ku nasan maalintaas hoos, sariiro iyo cunno raaxa leh, xagga Alle na waxaa uga iman salaan nabad galyo. **[Yaasiin: 51-58].**

59. Soocma maanta danbiilayaalyahow (gaalada).

وَٱمْتَٰزُوا۟ ٱلْيَوْمَ أَيُّهَا ٱلْمُجْرِمُونَ ﴿٥٩﴾

60. Miyaanan idinkula ballamin bani Aadamow inaydaan caabudin shaydaan, illeen col muuqda yuu idiin yahay.

* أَلَمْ أَعْهَدْ إِلَيْكُمْ يَٰبَنِىٓ ءَادَمَ أَن لَّا تَعْبُدُوا۟ ٱلشَّيْطَٰنَ ۖ إِنَّهُۥ لَكُمْ عَدُوٌّ مُّبِينٌ ﴿٦٠﴾

61. Ood ani i caabudaan, taasina waa wadada toosan.

وَأَنِ ٱعْبُدُونِى ۚ هَٰذَا صِرَٰطٌ مُّسْتَقِيمٌ ﴿٦١﴾

62. Dhab ahaan wuxuu u dhumiyay (shaydaan) xaggiinna dad badan, miyaydaan wax kasaynin.

وَلَقَدْ أَضَلَّ مِنكُمْ جِبِلًّا كَثِيرًا ۖ أَفَلَمْ تَكُونُوا۟ تَعْقِلُونَ ﴿٦٢﴾

63. Tanina waa jahannamadii laydiinku yaboohay.

هَٰذِهِۦ جَهَنَّمُ ٱلَّتِى كُنتُمْ تُوعَدُونَ ﴿٦٣﴾

64. Ee gala maanta gaalnimadiinnii darteed.

ٱصْلَوْهَا ٱلْيَوْمَ بِمَا كُنتُمْ تَكْفُرُونَ ﴿٦٤﴾

65. Maanta waxaan daboolaynaa afkooda, waxaana nala hadli gacmahooda waxaana ku marag furi lugahooda waxay kasban jireen.

ٱلْيَوْمَ نَخْتِمُ عَلَىٰٓ أَفْوَٰهِهِمْ وَتُكَلِّمُنَآ أَيْدِيهِمْ وَتَشْهَدُ أَرْجُلُهُم بِمَا كَانُوا۟ يَكْسِبُونَ ﴿٦٥﴾

66. Haddaan doonno waan indha tiraynaa oo markaas ay u dag-dagaan waddada, sayse u arki.

وَلَوْ نَشَآءُ لَطَمَسْنَا عَلَىٰٓ أَعْيُنِهِمْ فَٱسْتَبَقُوا۟ ٱلصِّرَٰطَ فَأَنَّىٰ يُبْصِرُونَ ﴿٦٦﴾

67. Haddaan doonnana waan doorinaynaa, mana karayaan tagid iyo soo noqosho midna.

وَلَوْ نَشَآءُ لَمَسَخْنَٰهُمْ عَلَىٰ مَكَانَتِهِمْ فَمَا ٱسْتَطَٰعُوا۟ مُضِيًّا وَلَا يَرْجِعُونَ ﴿٦٧﴾

68. Ruuxaan cimri siinno waxaannu ku gaddin abuuridda (waannu tabar yarayn) ee miyaydaan wax kasayn.

وَمَن نُّعَمِّرْهُ نُنَكِّسْهُ فِى ٱلْخَلْقِ ۖ أَفَلَا يَعْقِلُونَ ﴿٦٨﴾

Maalinta qiyaame waa la kala bixi, gaaladana meel gaar ah yaa looga sooci mu'miniinta, dadkana wuxuu Alle warsan kuna canaanan inay jebiyeen dardaarankii iyo ballankii ahaa in Alle la caabudo shaydaanna laga digtoonaado, illeen waa colka waxbadan dhumiyee, gaalana waxay gali naarta jahannamo iyagoo la aamusiiyay oo gacmahoodu iyo lugahoodu hadli, Alle na hadduu doono dadka wuu indha tiri, hadduu doonana wuu doorin iyagoo sii noqod iyo soo noqod karayn. **[Yaasiin: 59-68].**

69. Maannaan barin Nabiga shicirka, kumana habboona, waxaan (barnay) uun waano iyo quraan cad.

وَمَا عَلَّمْنَٰهُ ٱلشِّعْرَ وَمَا يَنۢبَغِى لَهُۥٓ ۚ إِنْ هُوَ إِلَّا ذِكْرٌ وَقُرْءَانٌ مُّبِينٌ ﴿٦٩﴾

70. Si uu ugu digo ruuxii nool (xaqa raaci) cadaabna ugu sugnaado gaalada.

لِّيُنذِرَ مَن كَانَ حَيًّا وَيَحِقَّ ٱلْقَوْلُ عَلَى ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٧٠﴾

71. Miyeyna arkaynin inaan uga abuurnay waxaan sameynay xoolo ay hantaan.

أَوَلَمْ يَرَوْا۟ أَنَّا خَلَقْنَا لَهُم مِّمَّا عَمِلَتْ أَيْدِينَآ أَنْعَٰمًا فَهُمْ لَهَا مَٰلِكُونَ ﴿٧١﴾

72. Oon u laylinnay, ooy waxna ka koraan waxna ka cunaan.

وَذَلَّلْنَٰهَا لَهُمْ فَمِنْهَا رَكُوبُهُمْ وَمِنْهَا يَأْكُلُونَ ﴿٧٢﴾

73. Waxaana ugu sugan manfacado iyo cabid ee miyayna mahdinaynin Alle.

وَلَهُمْ فِيهَا مَنَٰفِعُ وَمَشَارِبُ ۖ أَفَلَا يَشْكُرُونَ ﴿٧٣﴾

74. Waxay ka yeesheen Alle ka soke ilaahyaal inay u gargaaraan.

وَٱتَّخَذُوا۟ مِن دُونِ ٱللَّهِ ءَالِهَةً لَّعَلَّهُمْ يُنصَرُونَ ﴿٧٤﴾

لَا يَسْتَطِيعُونَ نَصْرَهُمْ وَهُمْ لَهُمْ جُندٌ مُّحْضَرُونَ ﴿٧٥﴾

75. Mana karaan gargaarkooda waxayna u yihiin junuud (askar) kulmisan.

فَلَا يَحْزُنكَ قَوْلُهُمْ ۘ إِنَّا نَعْلَمُ مَا يُسِرُّونَ وَمَا يُعْلِنُونَ ﴿٧٦﴾

76. Ee yuuna ku walbahaar galinnin hadalkoodu annagaa og waxay qarsan iyo waxay muujinbee.

Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) Alle waa ka fogeeyey inuu baro shicir iyo gabay, ee wuxuu Alle ku soo dajiyay quraan xaq ah, si loogu digo ciddii qalbigeedu nool yahay. Gaaladana uu xujo ugu noqdo. Alle na nicmooyin badan yuu ugu nicmeeyey dadka sida xoolaha oo una laylyay si loogu nacfiyo, hase yeeshee dadka badankiis Alle kuma mahdinin ee waxay yeesheen ilaahyaal ay ag tuban yihiin oon waxba u tarayn, yaynase ku walbahaar galinin, Alle waa og yahay sirtooda iyo caddankoodee. Rasuulku wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): inuu ka buuxsamo bagga mid kiin malax yaa ka khayr roon inuu ka buuxsamo gabay (xun). Waxaa weriyay Bukhaari iyo Muslim. **[Yaasiin: 69-76].**

أَوَلَمْ يَرَ ٱلْإِنسَٰنُ أَنَّا خَلَقْنَٰهُ مِن نُّطْفَةٍ فَإِذَا هُوَ خَصِيمٌ مُّبِينٌ ﴿٧٧﴾

77. Miyuusan arag dadku (oo ogayn) inaan ka abuurnay dhibic, markaas uu noqday dood badane cad.

وَضَرَبَ لَنَا مَثَلًا وَنَسِىَ خَلْقَهُۥ ۖ قَالَ مَن يُحْىِ ٱلْعِظَٰمَ وَهِىَ رَمِيمٌ ﴿٧٨﴾

78. Wuxuuna noo yeelay tusaale wuuna halmaamay abuurkiisa wuxuuna yidhi: yaa noolayn lafo baaliyoobay.

قُلْ يُحْيِيهَا ٱلَّذِىٓ أَنشَأَهَآ أَوَّلَ مَرَّةٍ ۖ وَهُوَ بِكُلِّ خَلْقٍ عَلِيمٌ ﴿٧٩﴾

79. Waxaad dhahdaa waxaa noolayn Allihii ahaysiiyay markii horaba, abuur walbana waa ogyahay.

ٱلَّذِى جَعَلَ لَكُم مِّنَ ٱلشَّجَرِ ٱلْأَخْضَرِ نَارًا فَإِذَآ أَنتُم مِّنْهُ تُوقِدُونَ ﴿٨٠﴾

80. Allaha idiinka yeelay geedka cagaaran dab, oo markaas aad hursataan.

أَوَلَيْسَ ٱلَّذِى خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ بِقَٰدِرٍ عَلَىٰٓ أَن يَخْلُقَ مِثْلَهُم ۚ بَلَىٰ وَهُوَ ٱلْخَلَّٰقُ ٱلْعَلِيمُ ﴿٨١﴾

81. Allaha abuuray samooyinka iyo dhulka miyuusan karin inuu abuuro iyagoo kale, waa karaa, waana abuur badane ogaansho badan.

82. Amarka Alle na markuu wax inuu abuuro doono waa inuu ku yidhaahdo uun ahaw oo uu ahaado.

إِنَّمَآ أَمۡرُهُۥٓ إِذَآ أَرَادَ شَيۡـًٔا أَن يَقُولَ لَهُۥ كُن فَيَكُونُ ﴿٨٢﴾

83. Waxaa nasahan (xumaan ka fog) Allaha ay gacantiisa ku jirto xukunka wax kasta, xaggiisaana laydiin soo celin.

فَسُبۡحَٰنَ ٱلَّذِي بِيَدِهِۦ مَلَكُوتُ كُلِّ شَيۡءٖ وَإِلَيۡهِ تُرۡجَعُونَ ﴿٨٣﴾

Aayadahanu waxay soo dageen markuu gaal la dhihi jiray ubayi binu khalaf uu u yimid Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) isagoo wata lafo duqoobay intuu burburiyayna oo dabaysha raaciyay yidhi: ma waxaad sheegi in tan Alle soo noolayn, markaasuu Nabigu ku yidhi: haa wuu ku dili Alle haddana ku soo noolayn naartana ku galin. Allaha dadka dhibic ka abuuray ee geedaha dabka ka ahaysiiyay wax walbana abuuray, cirka iyo dhulkuna awooddiisa ku jiraan markuu doonana ku dhihi waxaas ahaw markiibana ahaada miyaan karin inuu soo celiyo mar labaad dadka ama ka daali, Alle na wuu ka sarreeyaa oo ka nasahan yahay xumaan xaggiisaana dhamaan loo noqon ka dibna uu abaal marin cid walba. **[Yaasiin: 77-83].**

Suurat As-Saaffaat

سُورَةُ الصَّافَّاتِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. (Waxaan ku dhaartay) malaa'igta safan.

وَٱلصَّٰٓفَّٰتِ صَفًّا ﴿١﴾

2. Iyo tan kaxaysa daruuraha.

فَٱلزَّٰجِرَٰتِ زَجْرًا ﴿٢﴾

3. Iyo tan akhrida quuraanka.

فَٱلتَّٰلِيَٰتِ ذِكْرًا ﴿٣﴾

4. Ee ilaahiin waa mid (qudha).

إِنَّ إِلَٰهَكُمْ لَوَٰحِدٌ ﴿٤﴾

5. Waa Rabbiga samooyinka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya, iyo Rabbiga qorrax ka soo bixidda.

رَّبُّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا وَرَبُّ ٱلْمَشَٰرِقِ ﴿٥﴾

6. Annagaa ku qurxinnay samada dhaw quruxda xidiga ah.

إِنَّا زَيَّنَّا ٱلسَّمَآءَ ٱلدُّنْيَا بِزِينَةٍ ٱلْكَوَاكِبِ ﴿٦﴾

7. Iyo ka dhowrid shaydaan kastoo madax adag.

وَحِفْظًا مِّن كُلِّ شَيْطَٰنٍ مَّارِدٍ ﴿٧﴾

8. Mana dhagaystaan jameecada sare (malaa'igta), waxaana laga soo tuuraa dhan kasta.

لَّا يَسَّمَّعُونَ إِلَى ٱلْمَلَإِ ٱلْأَعْلَىٰ وَيُقْذَفُونَ مِن كُلِّ جَانِبٍ ﴿٨﴾

9. Iyagoo la eryi oo cadaab joogta ah u sugnaaday.

دُحُورًا وَلَهُمْ عَذَابٌ وَاصِبٌ ﴿٩﴾

10. Marka laga reebo mid mid dafa hadalka oo uu raaco danab ifi.

إِلَّا مَنْ خَطِفَ ٱلْخَطْفَةَ فَأَتْبَعَهُۥ شِهَابٌ ثَاقِبٌ ﴿١٠﴾

Waxay ku billaabatay suuraddu inuu Alle ku dhaartay malaa'igta inuu kali yahay iyo samada iyo dhulka iyo wax walba awooddiisa ku jiraan, iyo inuu

cirka ku qurxiyay xiddigo kana reebay shaydaanka inuu u dhawaado ama wax ka dhagaysto, Qataade wuxuu yidhi: xiddigaha: waxaa loo abuuray saddex: shayadiinta oo lagu gano, nuur lagu tooso (oo lagu garto jahooyinka) iyo quruxda samada dhaw. **[As-Saaffaat: 1-10].**

11. Waydii gaalada ma iyagaa ku daran abuuridda mise waxaan abuuray, annagaa ka abuurray dhoobo dhagta.

فَٱسْتَفْتِهِمْ أَهُمْ أَشَدُّ خَلْقًا أَم مَّنْ خَلَقْنَآ ۚ إِنَّا خَلَقْنَٰهُم مِّن طِينٍ لَّازِبٍ ﴿١١﴾

12. Waxaadse la yaabtay (beenintooda) iyaguna way jees jeesi.

بَلْ عَجِبْتَ وَيَسْخَرُونَ ﴿١٢﴾

13. Marka la waaniyana ma waantoobaana.

وَإِذَا ذُكِّرُوا۟ لَا يَذْكُرُونَ ﴿١٣﴾

14. Hadday calaamo arkaanna way ku jees jeesaan.

وَإِذَا رَأَوْا۟ ءَايَةً يَسْتَسْخِرُونَ ﴿١٤﴾

15. Waxayna dhahaan kani waxaan sixir cad ahayn ma aha.

وَقَالُوٓا۟ إِنْ هَٰذَآ إِلَّا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿١٥﴾

16. Waxayna dhahaan ma markaan dhimanno oon carro noqonno iyo lafo yaa nala soo bixin.

أَءِذَا مِتْنَا وَكُنَّا تُرَابًا وَعِظَٰمًا أَءِنَّا لَمَبْعُوثُونَ ﴿١٦﴾

17. Aabayaalkannagii hore (iyagana ma la soo celin).

أَوَءَابَآؤُنَا ٱلْأَوَّلُونَ ﴿١٧﴾

18. Waxaad dhahdaa haa waa laydin soo celin idinkoo waliba dullaysan.

قُلْ نَعَمْ وَأَنتُمْ دَٰخِرُونَ ﴿١٨﴾

19. Xaaladduna waa uun qaylo kaliya markaas, waxaa soo bixi dadkii oo wax eegi.

فَإِنَّمَا هِىَ زَجْرَةٌ وَٰحِدَةٌ فَإِذَا هُمْ يَنظُرُونَ ﴿١٩﴾

20. Waxayna dhihi gaaladii halaaggannagee kan waa maalintii abaalmarinta.

وَقَالُوا۟ يَٰوَيْلَنَا هَٰذَا يَوْمُ ٱلدِّينِ ﴿٢٠﴾

21. Waxaana lagu dhihi kani waa maalintii kala bixinta ee aad beenin jirteen.

هَٰذَا يَوْمُ ٱلْفَصْلِ ٱلَّذِى كُنتُم بِهِۦ تُكَذِّبُونَ ﴿٢١﴾

22. Kulmiya kuwii daalimiinta ahaa iyo wixii la mid ahaa iyo waxay caabudi jireen.

۞ ٱحۡشُرُواْ ٱلَّذِينَ ظَلَمُواْ وَأَزۡوَٰجَهُمۡ وَمَا كَانُواْ يَعۡبُدُونَ ٢٢

23. Oo Alle ka soo hadhay, tusiyana jidka jaxiimo.

مِن دُونِ ٱللَّهِ فَٱهۡدُوهُمۡ إِلَىٰ صِرَٰطِ ٱلۡجَحِيمِ ٢٣

24. Joojiyana waxbaa la waydiine.

وَقِفُوهُمۡۖ إِنَّهُم مَّسۡـُٔولُونَ ٢٤

25. (Waxaana lagu dhihi) maxaad leedihiin oy daan isugu gargaaraynin.

مَا لَكُمۡ لَا تَنَاصَرُونَ ٢٥

26. Saas ma aha ee maanta way is dhiibeen.

بَلۡ هُمُ ٱلۡيَوۡمَ مُسۡتَسۡلِمُونَ ٢٦

Alle kor ahaaye wuxuu faray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu gaalada soo bixinta diiddan warsado ma iyagaa ka daran khalqiga kale, waxayse ku jawaabeen dafiraad iyo jees jees iyo xumaan, waase la soo bixin qiyaamada iyagoo dullaysan, oo calaacali, waxaase loo sheegi inay tahay maalintii abaalmarinta iyo wax la warsan lana tusi jidka naarta jaxiimo, isagoo is dhiibi maalintaas, Cumar binu Khadaab wuxuu sheegay: in saaniga lala kulmin saaniga, kan ribadana kan ribada, kan khamridana kan khamrida. **[As-Saaffaat: 11-26].**

27. Wuxuu qaabilay qaarkood qaarki kale iyagoo wax is warsan.

وَأَقۡبَلَ بَعۡضُهُمۡ عَلَىٰ بَعۡضٖ يَتَسَآءَلُونَ ٢٧

28. Waxayna dhaheen kuwii wax raacay (raaciyadii) waxaad ahaydeen kuwo nooga yimaadda xagga midig (wanaagga, nagana reebi jirteen).

قَالُوٓاْ إِنَّكُمۡ كُنتُمۡ تَأۡتُونَنَا عَنِ ٱلۡيَمِينِ ٢٨

29. Waxay dhaheen madaxdii ma aha ee idinkaan mu'miniin ahayn.

قَالُواْ بَل لَّمۡ تَكُونُواْ مُؤۡمِنِينَ ٢٩

30. Wax xoog ah oon idin ku lahayn ma jirin, waxaadse ahaydeen qoom xad gudbey.

وَمَا كَانَ لَنَا عَلَيۡكُم مِّن سُلۡطَٰنٖۖ بَلۡ كُنتُمۡ قَوۡمٗا طَٰغِينَ ٣٠

فَحَقَّ عَلَيْنَا قَوْلُ رَبِّنَآ إِنَّا لَذَآئِقُونَ ﴿٣١﴾

31. Markaasuu nagu waajibay (nagu rumoobey) hadalkii Rabbigeen (ciqaab) waxaana dhadhaminaynaa (cadaabka).

فَأَغْوَيْنَٰكُمْ إِنَّا كُنَّا غَٰوِينَ ﴿٣٢﴾

32. Markaasaan idin dhuminnay annaguna waan dhunsanayn.

فَإِنَّهُمْ يَوْمَئِذٍ فِى ٱلْعَذَابِ مُشْتَرِكُونَ ﴿٣٣﴾

33. Iyagu maalintaas cadaabkay wadaagi.

إِنَّا كَذَٰلِكَ نَفْعَلُ بِٱلْمُجْرِمِينَ ﴿٣٤﴾

34. Annaguna saasaan ku fallaa dambiilayaasha.

إِنَّهُمْ كَانُوٓا۟ إِذَا قِيلَ لَهُمْ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا ٱللَّهُ يَسْتَكْبِرُونَ ﴿٣٥﴾

35. Waxayna ahaayeen marka lagu dhaho Alle mooyee ilaah kale oo xaq lagu caabudo ma jiro kuwa iskibriya.

وَيَقُولُونَ أَئِنَّا لَتَارِكُوٓا۟ ءَالِهَتِنَا لِشَاعِرٍ مَّجْنُونٍ ﴿٣٦﴾

36. Oo dhaha ma waxaan uga tagaynaa ilaahyadannada gabayaa waalan.

بَلْ جَآءَ بِٱلْحَقِّ وَصَدَّقَ ٱلْمُرْسَلِينَ ﴿٣٧﴾

37. Saas ma aha ee wuxuu la yimid (Nabigu) xaq wuuna rumeeyey rasuulladii (Alle soo diray).

Aayadahan wuxuu Alle ku sheegay in maalinta qiyaamaha gaaladu qaarkood qaarka kale dagaali sida madaxda iyo kuwii xumaanta ku raacay, ugu dambeyntana waa in dhammaantood baadi ahaayeen cadaabkana ay ku kulmi mar hadday xumaanta ku kulmi jireen, maxaa yeelay waxay iska waynayn jireen marka lagu dhaho Alle mooyee ilaah kale oo xaq lagu caabudo ma jiro, iyo inay Nabiga xumaan iyo waalli ku sheegaan isagoo xaq iyo rumaynta rasuulladii Alle la yimid, taasuna waxay muujini in xumaanta iyo fasaadka oo laysku raaco ay sababin calaacal ciqaab aakhiro. Ee waa in wanaagga lays faraa xumaantana laysaga digo. **[As-Saaffaat: 27-37].**

إِنَّكُمْ لَذَآئِقُوا۟ ٱلْعَذَابِ ٱلْأَلِيمِ ﴿٣٨﴾

38. Idinku (gaaloy) waxaaad dhadhamisaan cadaabka daran (wax xanuujiya).

39. Waxaan camalkiinna ahaynna laydinkama abaalmariyo.

وَمَا تُجْزَوْنَ إِلَّا مَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٣٩﴾

40. Addoommada Alle ee niyada san (xumaan ma arkaan).

إِلَّا عِبَادَ ٱللَّهِ ٱلْمُخْلَصِينَ ﴿٤٠﴾

41. Waxayna mudan kuwaasi risqi la yaqaanno (janno)

أُوْلَٰٓئِكَ لَهُمْ رِزْقٌ مَّعْلُومٌ ﴿٤١﴾

42. Faakihadna way heli, iyagoo lagu sharfi.

فَوَٰكِهُ وَهُم مُّكْرَمُونَ ﴿٤٢﴾

43. Jannooyinka naciima.

فِى جَنَّٰتِ ٱلنَّعِيمِ ﴿٤٣﴾

44. Waxayna ku sugnaan sariiro iyagoo is qaabili.

عَلَىٰ سُرُرٍ مُّتَقَٰبِلِينَ ﴿٤٤﴾

45. Waxaana lala kor socon weel laga soo buuxiyay il (janno).

يُطَافُ عَلَيْهِم بِكَأْسٍ مِّن مَّعِينٍ ﴿٤٥﴾

46. Taasoo cad oo u macaan kuwa cabi.

بَيْضَآءَ لَذَّةٍ لِّلشَّٰرِبِينَ ﴿٤٦﴾

47. Mana laha caqli qaadid iyo waalli midna (khamrada jannada)

لَا فِيهَا غَوْلٌ وَلَا هُمْ عَنْهَا يُنزَفُونَ ﴿٤٧﴾

48. Agtoodana waxaa ahaan haween dhoowrsoon oo indha waaweyn.

وَعِندَهُمْ قَٰصِرَٰتُ ٱلطَّرْفِ عِينٌ ﴿٤٨﴾

49. Ood mooddo ukun la dhowray.

كَأَنَّهُنَّ بَيْضٌ مَّكْنُونٌ ﴿٤٩﴾

Xumaanle waa laga abaal marin xumaantiisa, isagoon la dulmiyayn, addoommada Alle ee suubanse waxay heli janno, nicmo, sharaf iyo nolal wanaagsan, waxaana u adeegi wiilal darban, waxaana loo darbi wax wanaagsan ooy cabaan ooy ka mid tahay khamri janno oo xalaal ah oon madax xanuun iyo waalli midna lahayn, waxaana loo dhammayn wanaag. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: khamrada adduunka waxaa ku sugan afar arrimood: waalli, madax xanuun, mantag iyo kaadi (badan). Tan aakhirase waa ka duwan tahay sida aayada badan sheegeen iyo hadalka Nabigu. **[As-Saaffaat: 38-49].**

50. Wuxuuna qaabilay qaarkood qaarka kale (ehelo jannaha) iyagoo wax is waydiin.

فَأَقْبَلَ بَعْضُهُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ يَتَسَآءَلُونَ ﴿٥٠﴾

51. Wuxuuna dhihi mid hadlay oo ka mid ah waxaan ku lahaa (adduunkii) saaxiib.

قَالَ قَآئِلٌ مِّنۡهُمۡ إِنِّي كَانَ لِي قَرِينٌ ﴿٥١﴾

52. Dhihi jiray adigu ma waxaad ka mid tahay kuwa rumeeyay (soo bixinta).

يَقُولُ أَئِنَّكَ لَمِنَ ٱلۡمُصَدِّقِينَ ﴿٥٢﴾

53. Ma markaan dhimanno oon carro noqonno iyo lafo yaa nala abaalmarin.

أَءِذَا مِتۡنَا وَكُنَّا تُرَابًا وَعِظَٰمًا أَءِنَّا لَمَدِينُونَ ﴿٥٣﴾

54. Wuxuuna dhihi mayla dayeeysaan.

قَالَ هَلۡ أَنتُم مُّطَّلِعُونَ ﴿٥٤﴾

55. Markaasuu dayaa kuna arkaa jaxiima dhexdeeda.

فَٱطَّلَعَ فَرَءَاهُ فِي سَوَآءِ ٱلۡجَحِيمِ ﴿٥٥﴾

56. Wuxuuna dhahaa Alle Ayaan ku dhaartaye waxaad u dhaweyd inaad i halaagto (i dhumiso).

قَالَ تَٱللَّهِ إِن كِدتَّ لَتُرۡدِينِ ﴿٥٦﴾

57. Haddayna nicmada Alle jirinna waxaan ahaan lahaa kuwa lagu soo kulmiyay (naarta).

وَلَوۡلَا نِعۡمَةُ رَبِّي لَكُنتُ مِنَ ٱلۡمُحۡضَرِينَ ﴿٥٧﴾

58. (Waxayna dhahaan ehelu jannuhu) miyeynaan dhimaneynin.

أَفَمَا نَحۡنُ بِمَيِّتِينَ ﴿٥٨﴾

59. Geerideennii hore (ee adduunka) mooyee, oo aanlayna cadaabayn.

إِلَّا مَوۡتَتَنَا ٱلۡأُولَىٰ وَمَا نَحۡنُ بِمُعَذَّبِينَ ﴿٥٩﴾

60. Taasina waa uun liibaanta wayn.

إِنَّ هَٰذَا لَهُوَ ٱلۡفَوۡزُ ٱلۡعَظِيمُ ﴿٦٠﴾

61. Ee taasoo kale ha faleen kuwa camal fali.

لِمِثۡلِ هَٰذَا فَلۡيَعۡمَلِ ٱلۡعَٰمِلُونَ ﴿٦١﴾

Waxaa horey loo soo sheegay inay ehelu naarku (Alle ha naga dheereeyee) is qaabili iyagoo calaacali oo is canaanan madax iyo raaciyadba, iyagoo isu dhihi adaa ii lahaa iyo adaa i dhumiyay. Halkanna waxaa lagu sheegay ehelu jannaha iyo inay is qaabili iyagoo ka sheekaysan saaxiibbadoodii adduunka ee xumaa iyo sida Alle uga koriyay uguna nicmeeyay, taasoo ayan ka dhimanayn. Xasan

Albasri wuxuu yidhi: waxay ogaadeen (ehelu jannuhu) in nicmo kasta geeri goyso, markaasay dheheen: (miyaynaan dhimanayn). **[As-Saaffaat: 50-61].**

62. Ma taasaa marti qaad u fiican (jannada) mise geeddii zaquum (xumeyd).

أَذَٰلِكَ خَيۡرٞ نُّزُلًا أَمۡ شَجَرَةُ ٱلزَّقُّومِ ٦٢

63. Annagaa uga yeellay fitno (imtixaan) daalimiinta.

إِنَّا جَعَلۡنَٰهَا فِتۡنَةٗ لِّلظَّٰلِمِينَ ٦٣

64. Waana geed ka soo baxda gunta jaxiimo.

إِنَّهَا شَجَرَةٞ تَخۡرُجُ فِيٓ أَصۡلِ ٱلۡجَحِيمِ ٦٤

65. Midhaheeduna waxaad mooddaa madaxyo shaydaan.

طَلۡعُهَا كَأَنَّهُۥ رُءُوسُ ٱلشَّيَٰطِينِ ٦٥

66. Iyaguna (ehelu naarku) waxbay ka cunaan, waxayna ka buuxiyaan caloosha.

فَإِنَّهُمۡ لَأٓكِلُونَ مِنۡهَا فَمَالِـُٔونَ مِنۡهَا ٱلۡبُطُونَ ٦٦

67. Waxayna kalooy mudan dheehid biyo kulayl daran.

ثُمَّ إِنَّ لَهُمۡ عَلَيۡهَا لَشَوۡبٗا مِّنۡ حَمِيمٖ ٦٧

68. Markaas waxay ku noqon jaxiimo.

ثُمَّ إِنَّ مَرۡجِعَهُمۡ لَإِلَى ٱلۡجَحِيمِ ٦٨

69. Waxay heleen aabbayaalkood oo baadi ah.

إِنَّهُمۡ أَلۡفَوۡاْ ءَابَآءَهُمۡ ضَآلِّينَ ٦٩

70. Iyaguna raadkoodii bay ku dag dagi.

فَهُمۡ عَلَىٰٓ ءَاثَٰرِهِمۡ يُهۡرَعُونَ ٧٠

71. Waxaa dhab ahaan u dhumay hortood badi kuwii hore.

وَلَقَدۡ ضَلَّ قَبۡلَهُمۡ أَكۡثَرُ ٱلۡأَوَّلِينَ ٧١

72. Waxaanna u dirray dhexdooda u digayaal.

وَلَقَدۡ أَرۡسَلۡنَا فِيهِم مُّنذِرِينَ ٧٢

73. Ee eeg siday noqotay cidhibtii kuwii loo digay.

فَٱنظُرۡ كَيۡفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلۡمُنذَرِينَ ٧٣

74. Hasa yeeshee addoommadii Alle ee niyada samaa (cadaab ma arkaan).

إِلَّا عِبَادَ ٱللَّهِ ٱلۡمُخۡلَصِينَ ٧٤

Alle (weynaaye) markuu soo sheegay ehelujannaha iyo wuxuu ku abaalmariyay ayuu raaciyay geed xun oo lagu margado laguna quudiyo ehelu naarka, taasoo lagu fidmeeyay intay adduunka joogeen. Sida gaalkii Abuujahal oo yidhi markuu maqlay geedaas: ma waxaan timir iyo burcad aan cunno ahaynbaa mase aha siduu sheegayee waa geed daran oo madax shaydaan leh kana soo baxda jaxiima salkeeda, ehelu naarkana isku cuno iyada iyo biyo kulayl badan hooygooduna waa jaxiimo, maxaa yeelay aabayaalkood oo dhunsan yey heleen kuna raaceen xumaanta, iyaga ka horna waxaa dhumay kuwii horreeyey badidood inkastoo loo diray u dige waana la ciqaabay. **[As-Saaffaat: 62-74].**

وَلَقَدْ نَادَىٰنَا نُوحٌ فَلَنِعْمَ ٱلْمُجِيبُونَ ﴿٧٥﴾

75. Waxaa dhab ahaan noogu dhawaaqay (beryey) Nabi Nuux, cid wax ajiibana (maqlana) annagaa u fiican.

وَنَجَّيْنَٰهُ وَأَهْلَهُۥ مِنَ ٱلْكَرْبِ ٱلْعَظِيمِ ﴿٧٦﴾

76. Waxaanna ka korinnay isaga iyo ehelkiisiiba shiddadii waynayd (maanshayntii).

وَجَعَلْنَا ذُرِّيَّتَهُۥ هُمُ ٱلْبَاقِينَ ﴿٧٧﴾

77. Waxaanna ka yeellay faraciisii kuwa soo hadhay uun.

وَتَرَكْنَا عَلَيْهِ فِى ٱلْءَاخِرِينَ ﴿٧٨﴾

78. Waxaanna ugu reebnay kuwa dambeeya (ammaan ah):

سَلَٰمٌ عَلَىٰ نُوحٍ فِى ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٧٩﴾

79. Nabadgalyo Nuux korkiisa adduunyada ha u dhex ahaato.

إِنَّا كَذَٰلِكَ نَجْزِى ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿٨٠﴾

80. Saasaana ku abaal marinnaa samafalayaalka.

إِنَّهُۥ مِنْ عِبَادِنَا ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٨١﴾

81. Wuxuuna ka mid yahay addoommadannada rumeeyay (xaqa).

ثُمَّ أَغْرَقْنَا ٱلْءَاخَرِينَ ﴿٨٢﴾

82. Markaasaan maanshaynay kuwii kale.

* وَإِنَّ مِن شِيعَتِهِۦ لَإِبْرَٰهِيمَ ﴿٨٣﴾

83. Waxaa ka mid ah gargaarayaashiisa (jidkiisa qaaday) Nabi Ibraahin.

إِذْ جَآءَ رَبَّهُۥ بِقَلْبٍ سَلِيمٍ ﴿٨٤﴾

84. Markuu ula yimid Rabbigiis qalbi fayow (xaq rumeeyey).

إِذْ قَالَ لِأَبِيهِ وَقَوْمِهِۦ مَاذَا تَعْبُدُونَ ﴿٨٥﴾

85. Markuuu ku yidhi aabihiis iyo qoomkiisii maxaad caabudaysaan.

أَئِفْكًا ءَالِهَةً دُونَ ٱللَّهِ تُرِيدُونَ ﴿٨٦﴾

86. Ma been abuurasho yaad ilaahyo Alle ka soo hadhay u dooranaysaan.

فَمَا ظَنُّكُم بِرَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٨٧﴾

87. Maxaadse ka maleysaneysaan Rabbiga caalamka.

Qisada Nabi Nuux iyo qoomkiisii iyo sida Alle u koriyay isaga iyo intii raacday, una halaagay gaaladii beenisay wax badan bey quraanka ku soo aroortay, sidoo kale Nabi Ibraahimkii wadadii xaqa ahayd ku raacayna isna wax badan yaa quraanku ka waramay, iyo sida Alle qalbigiisa u wanaajiyay xaqana u raaciyey, iyo wixii dhex maray isaga iyo aabihiis iyo qoomkiisii oo dhib iyo xaq u sheeg ah, maxaase Alle laga malaysan haddii xumaan lagu madax adkaado iyo gaallimo, xasan albasari wuxuu yidhi: qalbiga fayow waa kan ka nabadgalay gaalnimo. **[As-Saaffaat: 75-87].**

فَنَظَرَ نَظْرَةً فِى ٱلنُّجُومِ ﴿٨٨﴾

88. Markasuu eegay Nabi Ibraahim xiddigaha.

فَقَالَ إِنِّى سَقِيمٌ ﴿٨٩﴾

89. Wuxuuna yidhi waan bukaa.

فَتَوَلَّوْا۟ عَنْهُ مُدْبِرِينَ ﴿٩٠﴾

90. Markaasay ka tageen kana jeedsadeen.

فَرَاغَ إِلَىٰٓ ءَالِهَتِهِمْ فَقَالَ أَلَا تَأْكُلُونَ ﴿٩١﴾

91. Markasuu aaday ilaahyaalkoodii (sanamyadii) wuxuuna ku yidhi miyeydaan (wax) cunayn.

مَا لَكُمْ لَا تَنطِقُونَ ﴿٩٢﴾

92. Maxaad leedihiin oydaan la hadlaynin.

فَرَاغَ عَلَيْهِمْ ضَرْبًۢا بِٱلْيَمِينِ ﴿٩٣﴾

93. Markaasuu ku foorariyay midigta oo ku garaacay.

فَأَقْبَلُوٓا۟ إِلَيْهِ يَزِفُّونَ ﴿٩٤﴾

94. Wayna soo qaabileen gaaladii xaggiisa iyagoo dag dagi (markuu jajabiyay).

قَالَ أَتَعْبُدُونَ مَا تَنْحِتُونَ ﴿٩٥﴾

95. Wuxuuna ku yidhi ma waxaad caabudaysaan waxaad qoraysaan (sameyseen).

96. Alle ayaana idin abuuray idinka iyo waxaad camal falaysaan.

وَٱللَّهُ خَلَقَكُمْ وَمَا تَعْمَلُونَ ﴿٩٦﴾

97. Waxayna dhaheen u dhisa meel (dab lagu shido) kuna tuura jaxiimo (dabka).

قَالُواْ ٱبْنُواْ لَهُۥ بُنْيَٰنًا فَأَلْقُوهُ فِى ٱلْجَحِيمِ ﴿٩٧﴾

98. Waxay la dooneen dhagar iyagaana ka yeellay kuwo hooseeya (laga adkaaday).

فَأَرَادُواْ بِهِۦ كَيْدًا فَجَعَلْنَٰهُمُ ٱلْأَسْفَلِينَ ﴿٩٨﴾

Aayadahan waxay ka warrami Nabi Ibraahim iyo qoomkiisii sida suurada kalaba loogaga hadlay haddana wuxuu u sheegay inuu jirran yahay marey rabeen inay baxaan si uu u jajabiyo sanamyadooda, wuuna burburiyay intuu la hadlay kuna yidhi wax ma cuneysaan, gaaladii markay arkeen way cadhoodeen meel dab lagu shido yeyna u sameeyeen Nabi Ibraahim, wayna ku tuureen, Alle ayaase ka badbaadiyay, dhagartoodiina ka yeelay baaba', dullina ku danbeysiiyay, Qataado wuxuu yidhi: xiddiguu dayey, waa cirkuu dayey isagoo fikiri. **[As-Saaffaat: 88-98].**

99. Wuxuu yidhi anigu waxaan aadi Rabbigay (hijro) wuuna i toosin.

وَقَالَ إِنِّى ذَاهِبٌ إِلَىٰ رَبِّى سَيَهْدِينِ ﴿٩٩﴾

100. Rabbiyow wax iga sii kuwa suubban (ilmo).

رَبِّ هَبْ لِى مِنَ ٱلصَّٰلِحِينَ ﴿١٠٠﴾

101. Waxaanna ugu bishaaraynay wiil dabeeco san.

فَبَشَّرْنَٰهُ بِغُلَٰمٍ حَلِيمٍ ﴿١٠١﴾

102. Markuu ku gaadhay agtiisa socod (ama howl karnimo, taageero leh) wuxuu ku yidhi Nabi Ibraahim: wiilkayow waxaan ku arkay hurdada anoo ku gawrici ee eeg waxaad fali, wuxuuna yidhi: aabow samee waxa lagu faray waxaad heli hadduu Alle doono inaan ka mid noqdo kuwa samree.

فَلَمَّا بَلَغَ مَعَهُ ٱلسَّعْىَ قَالَ يَٰبُنَىَّ إِنِّىٓ أَرَىٰ فِى ٱلْمَنَامِ أَنِّىٓ أَذْبَحُكَ فَٱنظُرْ مَاذَا تَرَىٰ ۚ قَالَ يَٰٓأَبَتِ ٱفْعَلْ مَا تُؤْمَرُ ۖ سَتَجِدُنِىٓ إِن شَآءَ ٱللَّهُ مِنَ ٱلصَّٰبِرِينَ ﴿١٠٢﴾

103. Markay hoggaansameen oos u lagday wajiga.

فَلَمَّآ أَسْلَمَا وَتَلَّهُۥ لِلْجَبِينِ ﴿١٠٣﴾

وَنَـٰدَيْنَـٰهُ أَن يَـٰٓإِبْرَٰهِيمُ ﴿١٠٤﴾

104. Yaan u dhawaaqnay Ibraahimow.

قَدْ صَدَّقْتَ ٱلرُّءْيَآ ۚ إِنَّا كَذَٰلِكَ نَجْزِى ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿١٠٥﴾

105. Dhab ahaan baad ugu rumeysay riyadii, sasaanna ku abaalmarinnaa samafalayaasha.

إِنَّ هَـٰذَا لَهُوَ ٱلْبَلَـٰٓؤُا۟ ٱلْمُبِينُ ﴿١٠٦﴾

106. Taasina waa imtixaan muuqda (oo weyn).

وَفَدَيْنَـٰهُ بِذِبْحٍ عَظِيمٍ ﴿١٠٧﴾

107. Waxaanna ku furannay loog weyn (wan).

وَتَرَكْنَا عَلَيْهِ فِى ٱلْـَٔاخِرِينَ ﴿١٠٨﴾

108. Waxaanna ugaga tagnay (ugu reebnay) kuwa dambe.

سَلَـٰمٌ عَلَىٰٓ إِبْرَٰهِيمَ ﴿١٠٩﴾

109. Nabadgalyo (salaan) Nabi Ibraahim korkiisa ha ahaato.

كَذَٰلِكَ نَجْزِى ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿١١٠﴾

110. Saasaanna ku abaal marinnaa samofalayaasha.

إِنَّهُۥ مِنْ عِبَادِنَا ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١١١﴾

111. Wuxuu ka mid ahaa addoommadannada mu'miniinta ah.

وَبَشَّرْنَـٰهُ بِإِسْحَـٰقَ نَبِيًّا مِّنَ ٱلصَّـٰلِحِينَ ﴿١١٢﴾

112. Waxaan ugu bishaaraynay Isxaaq oo Nabi suubban ah.

وَبَـٰرَكْنَا عَلَيْهِ وَعَلَىٰٓ إِسْحَـٰقَ ۚ وَمِن ذُرِّيَّتِهِمَا مُحْسِنٌ وَظَالِمٌ لِّنَفْسِهِۦ مُبِينٌ ﴿١١٣﴾

113. Waana barakaynay Ibraahim iyo Isxaaqba, waxaana ka mid ah faracooda mid samafala iyo mid naftiisa si cad u dulmiya.

Nabi Ibraahin (nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) markii Alle u gargaaray yuu hijrooday, Alle na wuxuu ka baryey inuu siiyo ilmo fiican, markaasaa Alle siiyey Ismaaciil kuna imtixaanay inuu gawraco, haddana furtay markay u darbadeen fulinta amarkii Alle, magac fiicanna ugu reebey Alle adduunka, haddana uu ugu bishaareeyay Isxaaq oo suuban. Ibnu cabaas waxaa laga wariyey: kan la furtay waa Nabi Ismaaciil, yuhuudina waxay sheegtay inuu Isxaaq yahay, wayna been sheegeen. **[As-Saaffaat: 99-113].**

وَلَقَدْ مَنَنَّا عَلَىٰ مُوسَىٰ وَهَٰرُونَ ﴿١١٤﴾

114. Dhab ahaan yaan ugu mannaysannay (ugu nicmeeynay) Nabi Muuse iyo Nabi Haaruun (Nabinnimo).

وَنَجَّيْنَٰهُمَا وَقَوْمَهُمَا مِنَ ٱلْكَرْبِ ٱلْعَظِيمِ ﴿١١٥﴾

115. Waana ka korinnay iyaga iyo qoomkooda dhibaatadii waynayd.

وَنَصَرْنَٰهُمْ فَكَانُوا۟ هُمُ ٱلْغَٰلِبِينَ ﴿١١٦﴾

116. Waana u gargaarray, waxayna noqdeen kuwo adkaaday (sarreeyey).

وَءَاتَيْنَٰهُمَا ٱلْكِتَٰبَ ٱلْمُسْتَبِينَ ﴿١١٧﴾

117. Waxaanna siinnay kitaabkii caddaa.

وَهَدَيْنَٰهُمَا ٱلصِّرَٰطَ ٱلْمُسْتَقِيمَ ﴿١١٨﴾

118. Waxaanna ku hanuuninnay jidka toosan.

وَتَرَكْنَا عَلَيْهِمَا فِى ٱلْءَاخِرِينَ ﴿١١٩﴾

119. Waxaanna ugu dhaafnay dadka dambe, (ammaan ah).

سَلَٰمٌ عَلَىٰ مُوسَىٰ وَهَٰرُونَ ﴿١٢٠﴾

120. Nabadgalyo ha ahaato Nabi Muuse iyo Nabi Haaruun korkooda.

إِنَّا كَذَٰلِكَ نَجْزِى ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿١٢١﴾

121. Saasaan ku abaalmarinnaa kuwa wanaagga fala.

إِنَّهُۥ مِنْ عِبَادِنَا ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٢٢﴾

122. Waxayna ka mid yihiin addoommadannada mu'miniinta ah.

Nabi Muuse iyo walaalkiis Nabi Haaruun meelo badan bay quraanka kaga soo arooreen, iyo waxay kala kulmeen Fircoon iyo qoomkiisii iyo bani israa'iil markii danbe iyo inuu Alle ka koriyay iyaga iyo qoomkoodii dhibaatadii waynayd oo ahayd maansheyntii fircoon iyo colkiisii, Alle na kitaab cad siiyay, jidka wanaagsanna ku toosiyay sharaf iyo magac fiicanna u reebay, waxayna ku tusin arrinkaasu in Alle la jiro oo gargaar iyo sharaf u dambaysiin ciddii xaqa iyo runta ku dadaasha. Dabari wuxuu yidhi: jidka toosani waa diinta islaamka waana diinta Alle ee uu Nabiyada ku bixiyay. **[As-Saaffaat: 114-122].**

123. Ilyaasna wuxuu ka mid ahaa rasuullada.

وَإِنَّ إِلْيَاسَ لَمِنَ ٱلْمُرْسَلِينَ ﴿١٢٣﴾

124. Markuu ku yidhi qoomkiisii miyeydaan dhawrsaneyn (Alle ka yaabayn).

إِذْ قَالَ لِقَوْمِهِۦٓ أَلَا تَتَّقُونَ ﴿١٢٤﴾

125. Ma waxaad baryeysaan bacli (sanam) ood ka tagaysaan Allaha u wanaagsan inta wax sancaysa ee wax jaangoysa.

أَتَدْعُونَ بَعْلًا وَتَذَرُونَ أَحْسَنَ ٱلْخَٰلِقِينَ ﴿١٢٥﴾

126. Ee ah Alle, Rabbigiinna iyo Rabbiga aabbayaalkiinnii hore.

ٱللَّهَ رَبَّكُمْ وَرَبَّ ءَابَآئِكُمُ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿١٢٦﴾

127. Markaasay beeniyeen, waxaana loo soo kulmin (cadaab).

فَكَذَّبُوهُ فَإِنَّهُمْ لَمُحْضَرُونَ ﴿١٢٧﴾

128. Laakiin addoommada Alle ee niyadda san (waxay la kulmi khayr).

إِلَّا عِبَادَ ٱللَّهِ ٱلْمُخْلَصِينَ ﴿١٢٨﴾

129. Waxaanna ugu reebnay dadka danbe (ammaan ah).

وَتَرَكْنَا عَلَيْهِ فِى ٱلْءَاخِرِينَ ﴿١٢٩﴾

130. Nabadgalyo ha ahaato Ilyaas korkiisa.

سَلَٰمٌ عَلَىٰٓ إِلْ يَاسِينَ ﴿١٣٠﴾

131. Saasaanna ku abaalmarinnaa kuwa sama fala.

إِنَّا كَذَٰلِكَ نَجْزِى ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿١٣١﴾

132. Wuxuuna ka mid yahay addoommadannada mu'miniinta ah.

إِنَّهُۥ مِنْ عِبَادِنَا ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٣٢﴾

Ilyaas wuxuu ka mid ahaa Nabiyada Alle, wuxuuna Alle u diray bini israa'iil oo caabudii jiray sanam la dhihi jiray Bacli, wuxuuna ugu yeedhay cibaadada Alle, iyo inay ka tagaan cibaadada waxa ka soo hadhay si daranna wuu u waaniyay, wuxuuna Alle ku abaalmariyey inuu ka yeelay addoommadiisa toosan ee wanaagga fala, magac fiicanna wuu ugu reebey dadka. Taasina waxay ku tusin inuu xaqa iyo cidda ku socotaayi wanaagga iyo cidhibta fiican ku danbeyn. Inkastoo baadilku muddooyin laga yaabo inuu muuqdo oo darraado. **[As-Saaffaat: 123-132].**

133. Nabi Luudhna wuxuu ka mid ahaa rasuullada (la diray).
وَإِنَّ لُوطًا لَّمِنَ ٱلْمُرْسَلِينَ ﴿١٣٣﴾

134. Xus markaan korinnay isaga iyo ehelkiisaba dhammaan.
إِذْ نَجَّيْنَٰهُ وَأَهْلَهُۥٓ أَجْمَعِينَ ﴿١٣٤﴾

135. Marka laga reebo cajuuso (haweeneydiisii) oo ku hadhay halaagga.
إِلَّا عَجُوزًا فِى ٱلْغَٰبِرِينَ ﴿١٣٥﴾

136. Ka dibna waxaan halaagnay intii kale.
ثُمَّ دَمَّرْنَا ٱلْءَاخَرِينَ ﴿١٣٦﴾

137. Idinkuna (reer Makaad) waxaad martaan dhulkoodii waabariga.
وَإِنَّكُمْ لَتَمُرُّونَ عَلَيْهِم مُّصْبِحِينَ ﴿١٣٧﴾

138. Iyo habeenkaba ee miyeydaan wax kasaynin.
وَبِٱلَّيْلِ ۗ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿١٣٨﴾

139. Nabi Yuunusna wuxuu ka mid ahaa rasuulladii (la diray).
وَإِنَّ يُونُسَ لَمِنَ ٱلْمُرْسَلِينَ ﴿١٣٩﴾

140. Xus markuu ku dhuuntay (ku cararay) doontii buuxday.
إِذْ أَبَقَ إِلَى ٱلْفُلْكِ ٱلْمَشْحُونِ ﴿١٤٠﴾

141. Oo uu qori ritay noqdayna mid laga reeyey, (Baddana lagu tuuray).
فَسَاهَمَ فَكَانَ مِنَ ٱلْمُدْحَضِينَ ﴿١٤١﴾

142. Kalluunna liqay isagoo la dagaalay.
فَٱلْتَقَمَهُ ٱلْحُوتُ وَهُوَ مُلِيمٌ ﴿١٤٢﴾

143. Hadduusan noqonnin kuwa Alle u tasbiixsada (xusa).
فَلَوْلَآ أَنَّهُۥ كَانَ مِنَ ٱلْمُسَبِّحِينَ ﴿١٤٣﴾

144. Wuxuu ku nagaan lahaa calooshiisa tan iyo maalinta la soo bixin dadka.
لَلَبِثَ فِى بَطْنِهِۦٓ إِلَىٰ يَوْمِ يُبْعَثُونَ ﴿١٤٤﴾

145. Waxaanna ku tuurray bannaan cidla ah isagoo buka.
* فَنَبَذْنَٰهُ بِٱلْعَرَآءِ وَهُوَ سَقِيمٌ ﴿١٤٥﴾

146. Waxaanna ka soo bixinnay korkiisa geedka yaqdiinka (bocorka) ah (hadhayn darteed).
وَأَنۢبَتْنَا عَلَيْهِ شَجَرَةً مِّن يَقْطِينٍ ﴿١٤٦﴾

147. Waxaanna u dirray boqol kun oo dad ah ama ka badan.

وَأَرْسَلْنَٰهُ إِلَىٰ مِاْئَةِ أَلْفٍ أَوْ يَزِيدُونَ ﴿١٤٧﴾

148. Wayna rumeeyeen, waxaanna u raaxaynay (sugnay) tan iyo muddo.

فَـَٔامَنُواْ فَمَتَّعْنَٰهُمْ إِلَىٰ حِينٍ ﴿١٤٨﴾

Nabi Luudh iyo Nabi Yuunus iyo Nabiyadii kaleba iyo qoomamkoodii waxay ku dambeeyeen iyo sida Alle ku kala maamulay quraankaa tilmaamay, waxaase muhim ah in xumaanta laga dheeraado, wanaaggana lagu dadaalo, tan kale waa in la ogaado in Alle wax walba karo farajkiisuna dhaw yahay ducadana aqbalo. Qisadiisuna waxay ahayd inuu dar Alle uga tagay ugana cadhooday qoomkiisii markaas Alle imtixaanay. Rasuulkuna wuxuu yidhi: cidna uma habboona inay dhahdo anaa ka khayr badan Yuunus bini Mataa. (Naxariis iyo nabadgalyo Alle korkooda ha yeelee). **[As-Saaffaat: 133-148].**

149. Waydii gaalada, in Allehaa gabdho yeeshay iyaguna wiilal.

فَٱسْتَفْتِهِمْ أَلِرَبِّكَ ٱلْبَنَاتُ وَلَهُمُ ٱلْبَنُونَ ﴿١٤٩﴾

150. Mise waxaan abuurray malaa'igta oo dhadig iyaguna ay joogeen.

أَمْ خَلَقْنَا ٱلْمَلَٰٓئِكَةَ إِنَٰثًا وَهُمْ شَٰهِدُونَ ﴿١٥٠﴾

151. Taasi waa been abuurashadoodii ay dhahayeen.

أَلَآ إِنَّهُم مِّنْ إِفْكِهِمْ لَيَقُولُونَ ﴿١٥١﴾

152. Alle waa dhalay waana beenaalayaal.

وَلَدَ ٱللَّهُ وَإِنَّهُمْ لَكَٰذِبُونَ ﴿١٥٢﴾

153. Ma wuxuu ka doortay gabdho wiilasha.

أَصْطَفَى ٱلْبَنَاتِ عَلَى ٱلْبَنِينَ ﴿١٥٣﴾

154. Maxaa idiinku wacan ood sidaas u xukumaysaan.

مَا لَكُمْ كَيْفَ تَحْكُمُونَ ﴿١٥٤﴾

155. Miyeeydaan wax xusuusaneyn.

أَفَلَا تَذَكَّرُونَ ﴿١٥٥﴾

156. Mise waxaa idiin sugnaatay xujo cad.

أَمْ لَكُمْ سُلْطَٰنٌ مُّبِينٌ ﴿١٥٦﴾

157. Keena kitaabkiinna (caddayn) haddaad runlayaal tihiin.

فَأْتُواْ بِكِتَٰبِكُمْ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿١٥٧﴾

158. Waxay yeeleen gaaladu Alle iyo jinniga dhexdooda (qaraabo) nasab, jinniguna dhab ahaan buu u ogyahay in gaalada la keeni (qiyaamada).

وَجَعَلُواْ بَيْنَهُۥ وَبَيْنَ ٱلْجِنَّةِ نَسَبًا ۚ وَلَقَدْ عَلِمَتِ ٱلْجِنَّةُ إِنَّهُمْ لَمُحْضَرُونَ ﴿١٥٨﴾

159. Alle ayaa ka nasahan (ka dheer) waxay ku tilmaamayaan.

سُبْحَٰنَ ٱللَّهِ عَمَّا يَصِفُونَ ﴿١٥٩﴾

160. Laakiin addoommada Alle ee niyadda suubbiyey (waa ka fog yihiin xumaan).

إِلَّا عِبَادَ ٱللَّهِ ٱلْمُخْلَصِينَ ﴿١٦٠﴾

Gaaladu had iyo jeer waa ay af xun yihiin iyagoo doqonnimana ku darsaday, halkanna waxay Alle (sarreeye) ku sheegeen in malaa'igtu gabdho u tahay, taasina waa beentoodii, ee Alle ma yeelannin ilmo wiil iyo gabadh midna, illeen uma baahnee, wax xuja ah ooy gaaladu haysana ma jiro, Alle na waa ka dheer yahay xumaan. Mujaahid wuxuu sheegay in gaaladu dhaheen: malaa'igtu waa gabdho Alle, sarreeye, markaasuu Abubakar yidhi: yaa hooyo u ah markaasay dhaheen: haween jinni. (Alle ayaa ka dheer waxay ku sheegeen). **[As-Saaffaat: 149-160]**.

161. Idinka iyo waxaad caabudaysaan (gaalooy).

فَإِنَّكُمْ وَمَا تَعْبُدُونَ ﴿١٦١﴾

162. Qofna kama fidmaysaan (dhumisaan) Alle.

مَآ أَنتُمْ عَلَيْهِ بِفَٰتِنِينَ ﴿١٦٢﴾

163. Marka laga reebo kuwa gali jaxiimo.

إِلَّا مَنْ هُوَ صَالِ ٱلْجَحِيمِ ﴿١٦٣﴾

164. Ruux kastoo naga mid ah (malaa'igta) wuxuu leeyahay meel lagu yaqaan.

وَمَا مِنَّآ إِلَّا لَهُۥ مَقَامٌ مَّعْلُومٌ ﴿١٦٤﴾

165. Waana safannahay (cibaado darteed).

وَإِنَّا لَنَحْنُ ٱلصَّآفُّونَ ﴿١٦٥﴾

166. Waana tasbiixsannaa (qaddarin Alle).

وَإِنَّا لَنَحْنُ ٱلْمُسَبِّحُونَ ﴿١٦٦﴾

167. Waxayna ahaayeen gaaladu kuwii dhaha.

وَإِن كَانُواْ لَيَقُولُونَ ﴿١٦٧﴾

168. Hadduu yahay agtannada xuskii (warkii) kuwii hore (kitaab).

لَوْ أَنَّ عِندَنَا ذِكْرًا مِّنَ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿١٦٨﴾

169. Waxaan noqon lahayn addoomaha Alle ee suubban.

لَكُنَّا عِبَادَ ٱللَّهِ ٱلْمُخْلَصِينَ ﴿١٦٩﴾

170. Wayse ka gaaloobeen kitaabkii (quraanka) wayna ogaan doonaan (waxa ku dhaca).

فَكَفَرُوا۟ بِهِۦ ۖ فَسَوْفَ يَعْلَمُونَ ﴿١٧٠﴾

Gaalo iyo waxay caabudi oo baadil ah midna ma karo inay wax dhumiyaan marka laga reebo kuwa wanaagga ka leexda ee xumaanta faraha la gala, ehelu naarna noqda malaa'igta Alle na xumaan waa ka fogtahay, mid walbana shaqo iyo meel lagu og yahay yuu leeyahay, waxayna u safan yihiin cibaadada Alle iyo wayneyntiisa. Gaaladii qureesheedna waxay ahaayeen intaan quraanku soo dagin kuwa jeclaa inay helaan kitaab uga warrama ummadihii hore, wayse ka gaaloobeen markuu u yimid, wayna ogaan doonaan cidhibteeda, waxaana la mid noqon iyaga cid kastoon quraanka iyo xaqa uu sheegi raacin rumayninna. Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhii: waxaa laynagaga fadilay dadka saddex: malaa'igta sideeda oon u safanno (salaadda), dhulkoo masjid inoo ah, iyo carrada oo daahir inoo ah. Waxaa wariyey Muslim. **[As-Saaffaat: 161-170].**

171. Dhab ahaan buu ugu hormaray yaboohannagii addoommahannagii aan dirray (rasuulladii).

وَلَقَدْ سَبَقَتْ كَلِمَتُنَا لِعِبَادِنَا ٱلْمُرْسَلِينَ ﴿١٧١﴾

172. In iyaga uun loo gargaari.

إِنَّهُمْ لَهُمُ ٱلْمَنصُورُونَ ﴿١٧٢﴾

173. Iyo in junuudannada (xaqa raacay) ay adkaan (guuleysan).

وَإِنَّ جُندَنَا لَهُمُ ٱلْغَٰلِبُونَ ﴿١٧٣﴾

174. Ee ka jeedso xaggooda tan iyo muddo.

فَتَوَلَّ عَنْهُمْ حَتَّىٰ حِينٍ ﴿١٧٤﴾

175. Fiirina iyaguna way fiirin doonaane (waxa ku dhaca).

وَأَبْصِرْهُمْ فَسَوْفَ يُبْصِرُونَ ﴿١٧٥﴾

176. Ma cadaabkannagay (gaaladu) dadajisan.

أَفَبِعَذَابِنَا يَسْتَعْجِلُونَ ﴿١٧٦﴾

177. Markuu ku dago cadaabku ardaagooda waxaa xumaan subaxa kuwa loo digay.

فَإِذَا نَزَلَ بِسَاحَتِهِمْ فَسَآءَ صَبَاحُ ٱلْمُنذَرِينَ ﴿١٧٧﴾

178. Ee ka jeedso xaggooda tan iyo muddo.

وَتَوَلَّ عَنْهُمْ حَتَّىٰ حِينٍ ﴿١٧٨﴾

179. Fiirina iyaguna way fiirin doonaane (waxa ku dhaca)

وَأَبْصِرْ فَسَوْفَ يُبْصِرُونَ ﴿١٧٩﴾

180. Waxaana ka nasahan Rabbigaada sharafta leh waxay ku tilmaamaan gaaladu (oo xun).

سُبْحَٰنَ رَبِّكَ رَبِّ ٱلْعِزَّةِ عَمَّا يَصِفُونَ ﴿١٨٠﴾

181. Nabadgalyana ha ahaato rasuulladii korkooda.

وَسَلَٰمٌ عَلَى ٱلْمُرْسَلِينَ ﴿١٨١﴾

182. Mahadna waxaa iska leh Allaha (barbaariyaha) caalamka ah.

وَٱلْحَمْدُ لِلَّهِ رَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿١٨٢﴾

Alle wuxuu ballan ku qaaday inuu u gargaaro addoommadiisa suubban markay si fiican u raacaan sharcigiisa iyo waddadiisa toosan, fuliyaanna amarkiisa siduu Nabiyadii iyo intii raacdayba ugu gargaaray. Tan kale ciqaabta Alle wax la dadajisto ma aha ee ha sugeen xaqdiidayaashu waxay kala kulmaan xumaanta iyo dulmiga. Alle na waa ka dheer yahay ceeb, wuxuuna mutaa mahad iyo wayneyn. Anas waxaa laga wariyey in Rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) yidhi maalintii khaybar: haddaan dagno ardaa qoom waxaa xumaada subaxa kuwa loo digay. Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim. **[As-Saaffaat: 171-182].**

Suurat Saad

سُورَةُ صٓ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

صٓۚ وَٱلْقُرْءَانِ ذِى ٱلذِّكْرِ ﴿١﴾

1. Xarafka hore wuxuu ku tusin mucjisada (quraanka), quraanka sharafta leh yaan ku dhaarannay (waa laydin soo bixin).

بَلِ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ فِى عِزَّةٍ وَشِقَاقٍ ﴿٢﴾

2. Kuwii gaaloobayna waxay ku sugan yihiin isla wayni iyo khilaaf (xaqdiiddo).

كَمْ أَهْلَكْنَا مِن قَبْلِهِم مِّن قَرْنٍ فَنَادَواْ وَّلَاتَ حِينَ مَنَاصٍ ﴿٣﴾

3. Immisaan halaagnay hortood ummad ay markaas dhawaaqeen waqti aan dhawaaq waxba tareynin.

وَعَجِبُوٓاْ أَن جَآءَهُم مُّنذِرٌ مِّنْهُمْۖ وَقَالَ ٱلْكَٰفِرُونَ هَٰذَا سَٰحِرٌ كَذَّابٌ ﴿٤﴾

4. Waxayna la yaabeen gaaladii inuu u yimaado dige ka mid ah waxayna dhaheen gaaladii kani waa sixirroow beenaale ah.

أَجَعَلَ ٱلْءَالِهَةَ إِلَٰهًا وَٰحِدًاۖ إِنَّ هَٰذَا لَشَىْءٌ عُجَابٌ ﴿٥﴾

5. Ma wuxuu ka dhigay ilaahyadii ilaah kaliya, arrintaasi waa wax lala yaabo.

وَٱنطَلَقَ ٱلْمَلَأُ مِنْهُمْ أَنِ ٱمْشُواْ وَٱصْبِرُواْ عَلَىٰٓ ءَالِهَتِكُمْۖ إِنَّ هَٰذَا لَشَىْءٌ يُرَادُ ﴿٦﴾

6. Wuu kala tagay shirkii (madaxdii) ka midka ahayd, waxayna isu dhaheen war socda oo ku samra (ku sugnaada) ilaahyaalkiinna, arrintani waa wax laynala dooni (oo lagu tashaday).

مَا سَمِعۡنَا بِهَٰذَا فِي ٱلۡمِلَّةِ ٱلۡأٓخِرَةِ إِنۡ هَٰذَآ إِلَّا ٱخۡتِلَٰقٌ ٧

7. Manaan ku maqlin tanoo kale diintii kale (nasraaniyada) arintan Alle kaliya waa wax la been abuurtay.

أَءُنزِلَ عَلَيۡهِ ٱلذِّكۡرُ مِنۢ بَيۡنِنَاۚ بَلۡ هُمۡ فِي شَكّٖ مِّن ذِكۡرِيۚ بَل لَّمَّا يَذُوقُواْ عَذَابِ ٨

8. Ma quraankaa lagu dajiyey isagoo na dhexjooga (annagaa ka mudan), waxayse kaga sugan yihiin quraankayga shaki, walina mayan dhadhamin cadaabkayga.

Alle wuxuu ku dhaartay inay gaalada makaad ku sugnaayeen khilaaf iyo kibir, iyadoo jirto inuu kuwo badan oo hortood gaaloobay Alle halaagay, calaacalna wax ma taro marka ruuxa xaqa diido oo ku tilmaamo cidda u yeedhi sixir iyo been iyo xumaan, mase wax lala yaabaa inuu Alle kali yahay, maxayse tari xumaan lagu madax adeygo iyo waxyaalo kale oo la caabudo iyo isla weynaan oon qiimo lahayn. **[Saad: 1-8].**

أَمۡ عِندَهُمۡ خَزَآئِنُ رَحۡمَةِ رَبِّكَ ٱلۡعَزِيزِ ٱلۡوَهَّابِ ٩

9. Ma agtooday tahay khasnadaha naxariista Allehaaga adkaada ee bixinta badan (khayrka).

أَمۡ لَهُم مُّلۡكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ وَمَا بَيۡنَهُمَاۖ فَلۡيَرۡتَقُواْ فِي ٱلۡأَسۡبَٰبِ ١٠

10. Mise waxaa u sugnaaday xukunka samooyinka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya, ha u koreen sallaanno xagga (samada).

جُندٞ مَّا هُنَالِكَ مَهۡزُومٞ مِّنَ ٱلۡأَحۡزَابِ ١١

11. Junuudda (colka) halkaas joogaana (gaalada) waa xisbiyo la jabin (laga adkaan).

كَذَّبَتۡ قَبۡلَهُمۡ قَوۡمُ نُوحٖ وَعَادٞ وَفِرۡعَوۡنُ ذُو ٱلۡأَوۡتَادِ ١٢

12. Waxaa beeniyey xaqan iyaga ka hor qoomkii (Nabi) Nuux iyo (reer) Caad iyo Fircoonkii tiirarka lahaa (xoogga weyn iyo boqortooyo sugan).

وَثَمُودُ وَقَوۡمُ لُوطٖ وَأَصۡحَٰبُ لۡـَٔيۡكَةِۚ أُوْلَٰٓئِكَ ٱلۡأَحۡزَابُ ١٣

13. Iyo reer Thamuud iyo qoomkii (Nabi) Luudh iyo asaxaabtii kaynta (qoomkii Nabi Shucayb), kuwaas waa xisbiyadii (xaqa beeniyey).

إِن كُلٌّ إِلَّا كَذَّبَ ٱلرُّسُلَ فَحَقَّ عِقَابِ ﴿١٤﴾

14. Midaan rasuullada beenin ma jiro, markaasay ciqaabtaydii ku dhacday.

وَمَا يَنظُرُ هَٰٓؤُلَآءِ إِلَّا صَيْحَةً وَٰحِدَةً مَّا لَهَا مِن فَوَاقٍ ﴿١٥﴾

15. Kuwaasuna (gaaladii makaad) ma sugayaan waxaan hal qaylo ahayn, mana laha celin iyo sugid (mudda yar) midna.

وَقَالُواْ رَبَّنَا عَجِّل لَّنَا قِطَّنَا قَبْلَ يَوْمِ ٱلْحِسَابِ ﴿١٦﴾

16. Waxayna dhaheen gaaladii Allow noo dadaji qaybtannada (ciqaabta) maalinta xisaabta ka hor (qiyaamada).

Khayr iyo wanaag Alle agtiisa yey yaallaan, cid wax ka og ama ku tasarrufi karta naxariista Alle oon isaga ahayn ma jirto, xukunka cirka iyo dhulka iyo waxa khalqi ah ee u dhaxeeyana Alle ayaa iska leh, si kastoo gaalo isugu daydo inay ogaato waxa Alle u qarsoonna uma suurowdo, ee jabaa u danbeyn sidii gaaladii horeba loo halaagay, ciqaab soo dadajinna wax Alle la warsado ma aha; maxaa yeeley dhab ahaan buu ruux walba ula kulmi wuxuu camal falay, Ibnu Jariir wuxuu yidhi: waxay warsadeen in adduunka loogu soo dadajiyo waxay mutaan khayr iyo sharba. **[Saad: 9-16].**

ٱصْبِرْ عَلَىٰ مَا يَقُولُونَ وَٱذْكُرْ عَبْدَنَا دَاوُۥدَ ذَا ٱلْأَيْدِ ۖ إِنَّهُۥٓ أَوَّابٌ ﴿١٧﴾

17. Ku samir (u adkayso) waxay sheegi xusuusana addoonkaygii Daa'uud ahaa ee xoogga lahaa, (xagga daacada Alle), wuxuuna ahaa noqosho (toobad keen) badane.

إِنَّا سَخَّرْنَا ٱلْجِبَالَ مَعَهُۥ يُسَبِّحْنَ بِٱلْعَشِيِّ وَٱلْإِشْرَاقِ ﴿١٨﴾

18. Annagaa u sakhirray (u fududaynay) buuraha, wayna la tasbiixsadaan galab iyo subaxba.

وَٱلطَّيْرَ مَحْشُورَةً ۖ كُلٌّ لَّهُۥٓ أَوَّابٌ ﴿١٩﴾

19. Shimbirahana waa loo kulmiyey, dhammaantoodna waxay u noqdaan (adeecaan) Alle.

وَشَدَدْنَا مُلْكَهُۥ وَءَاتَيْنَٰهُ ٱلْحِكْمَةَ وَفَصْلَ ٱلْخِطَابِ ﴿٢٠﴾

20. Waana adkaynay xukunkiisa (Daa'uud) waxaanna siinney xigmad (Nabinnimo) iyo

fahmo iyo hadal caddayn (iyo garsoorid).

21. Ma ku soo gaadhay warkii kuwii doodayey, markey mixraabka ugu soo dheceen.

* وَهَلْ أَتَىٰكَ نَبَؤُا۟ ٱلْخَصْمِ إِذْ تَسَوَّرُوا۟ ٱلْمِحْرَابَ ﴿٢١﴾

22. Una soo galeen Daa'uud oo markaas uu ka argagaxay, ayna ku dhaheen ha cabsan, waxaan nahay doodayaal qaarkanno qaarka kale dulmiyey, ee si xaq ah noo kala xukun, hana jowr falin, naguna hanuuni jidka toosan (xaqa).

إِذْ دَخَلُوا۟ عَلَىٰ دَاوُۥدَ فَفَزِعَ مِنْهُمْ ۖ قَالُوا۟ لَا تَخَفْ ۖ خَصْمَانِ بَغَىٰ بَعْضُنَا عَلَىٰ بَعْضٍ فَٱحْكُم بَيْنَنَا بِٱلْحَقِّ وَلَا تُشْطِطْ وَٱهْدِنَآ إِلَىٰ سَوَآءِ ٱلصِّرَٰطِ ﴿٢٢﴾

Alle wuxuu faray Nabigu inuu ku samro una adkeysto dhibka gaalada iyo xaqdiidnimadooda, markaasuu haddana xusuusiyey qisadii Nabi Daa'uud iyo siduu ugu dadaali jiray toobadda iyo cibaadada Alle, looguna sakhirey buuraha iyo shimbiraha ayna Alle la xusi jireen, xukun adag iyo xigmo iyo dood kala gaynna Alle siiyey, laguna imtixaamay caddaaladda iyo garsooridda, xadiith saxiix ahna waxaa ku sugnaa inuu Nabigu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee): salaad wuxuu Alle u jeclaa salaaddii daa'uud, soonna wuxuu Alle u jeclaa soonkii Daa'uud; wuxuuna seexan jiray habeenka barkiis, wuxuu kici jiray seddex meelood meel, hadana wuxuu seexan jiray sudus, wuxuuna soomi jiray maalin, maalinna wuu afuri jiray, mana carari jirin hadduu cadaw la kulmo. **[Saad: 17-22].**

23. (Waxayna dheheen) kani waa walaalkay wuxuuna leeyahay sagaal iyo sagaashan ido ah, anna waxaan leeyahay mid kaliya, wuxuuna sheegtay inaan siiyo, hadalkiina wuu igaga adkaaday.

إِنَّ هَٰذَآ أَخِى لَهُۥ تِسْعٌ وَتِسْعُونَ نَعْجَةً وَلِىَ نَعْجَةٌ وَٰحِدَةٌ فَقَالَ أَكْفِلْنِيهَا وَعَزَّنِى فِى ٱلْخِطَابِ ﴿٢٣﴾

24. Wuxuuna yidhi «Daa'uud»: wuu kugu dulmiyey warsashada laxdaada (inuu ku biiriyo) idihiisa, in badan oo ka mid ah kuwa wax isku darsadana qaarkood waxay ku xadgudbaan

قَالَ لَقَدْ ظَلَمَكَ بِسُؤَالِ نَعْجَتِكَ إِلَىٰ نِعَاجِهِۦ ۖ وَإِنَّ كَثِيرًا مِّنَ ٱلْخُلَطَآءِ لَيَبْغِى بَعْضُهُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ إِلَّا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ وَقَلِيلٌ مَّا هُمْ ۗ

(dulmiyaan) qaarka kale, marka laga reebo kuwa xaqa rumeeyey ee camalka wanaagsan falay, wayna yar yihiin kuwaasi, Daa'uudna wuxuu u maleeyey inaan ibtileynay wuxuuna ka dambidhaaf dalbay Allehiis, rukuuc (sujuud) buuna la dhacay wuuna noqday.

وَظَنَّ دَاوُۥدُ أَنَّمَا فَتَنَّٰهُ فَٱسْتَغْفَرَ رَبَّهُۥ وَخَرَّ رَاكِعًا وَأَنَابَ ۩ ﴿٢٤﴾

25. Markaasaan u dambi dhaafnay, agtannada wuxuu ku leeyahay dhawaansho iyo noqosho fiican (darajo sare).

فَغَفَرْنَا لَهُۥ ذَٰلِكَ ۖ وَإِنَّ لَهُۥ عِندَنَا لَزُلْفَىٰ وَحُسْنَ مَـَٔابٍ ﴿٢٥﴾

Qisadan ah inuu Alle imtixaamey Nabi Daa'uud iyo doodayaasha u yimid waxaa fiican in loo rumeeyo sida quraanku u sheegay lagana dheeraado waxyaalo kale oo taaban sharafta Nabiga, quraankana aan waafaqsaneyn, waxa muuqda waa inay doodayaal ugu yimaadeen Daa'uud si kada ah, kana codsadeen inuu cadaalad ku xukumo, wixii ka dhacayna Alle ka saamaxay xagga xukunka doodayaasha, waxaana cid walba looga baahan yahay toobadkeen iyo Alle ku xidhnaan hadday Nabiyaduba saas yihiin. **[Saad: 23-25].**

26. (Alle wuxuu yidhi): Daa'uudow annagaa kaa yeelley khaliifka dhulka ee dadka ku kala xukun xaqa hana raacin hawada (xun) oo kolkaas uu kaa dhumiyo jidka Alle, kuwa ka dhuma jidka Alle waxaa u sugnaaday cadaab daran halmaankoodii maalinta xisaabta (qiyaamada) darteed.

يَٰدَاوُۥدُ إِنَّا جَعَلْنَٰكَ خَلِيفَةً فِى ٱلْأَرْضِ فَٱحْكُم بَيْنَ ٱلنَّاسِ بِٱلْحَقِّ وَلَا تَتَّبِعِ ٱلْهَوَىٰ فَيُضِلَّكَ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ ۚ إِنَّ ٱلَّذِينَ يَضِلُّونَ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ لَهُمْ عَذَابٌ شَدِيدٌۢ بِمَا نَسُوا۟ يَوْمَ ٱلْحِسَابِ ﴿٢٦﴾

27. Maannaan u abuurin samada iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya dan la'aan (ciyaar). Taasina waa siday maleeyeen kuwii gaaloobay halaagguna wuxuu ugu sugnaaday kuwii gaaloobey naar.

وَمَا خَلَقْنَا ٱلسَّمَآءَ وَٱلْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَا بَٰطِلًا ۚ ذَٰلِكَ ظَنُّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ ۚ فَوَيْلٌ لِّلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مِنَ ٱلنَّارِ ﴿٢٧﴾

أَمْ نَجْعَلُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ كَٱلْمُفْسِدِينَ فِى ٱلْأَرْضِ أَمْ نَجْعَلُ ٱلْمُتَّقِينَ كَٱلْفُجَّارِ ﴿٢٨﴾

28. Miyaan ka yeeleynaa kuwii xaqa rumeeyey oo camal fiican falay sida kuwa hallayn dhulka, mise waxaan kala mid dhigaynaa kuwa dhowrsada kuwa xun oo kale (gaalada).

كِتَٰبٌ أَنزَلْنَٰهُ إِلَيْكَ مُبَٰرَكٌ لِّيَدَّبَّرُوٓاْ ءَايَٰتِهِۦ وَلِيَتَذَكَّرَ أُوْلُواْ ٱلْأَلْبَٰبِ ﴿٢٩﴾

29. (Quraanku) waa kitaab aan kugu soo dajinnay oo barakeysan, si ay u fiiriyaan dadku aayaadkiisa iyo inay waantoobaan kuwa caqliga leh.

Alle wuxuu faray Nabi Daa'uud inuu dadka cadaalad ku xukumo mar haduu ka dhigay khaliifka dhulka oosan raacin hawada naftiisa markaasna uu dhumo, ciddii jidka Alle ka dhuntana waxay mudan cadaab daran maalinta soo bixinta ay halmaameen darteed, cirka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya Alle wuxuu u abuuray xigmad iyo cid walba in lagu abaal mariyo wuxuu kasbaday, saasuuna u soo dajiyey kitaab barakeysan, si loogu waano qaato loona faro, Alle na isku mid kama dhigo muslim toosan iyo daalim xun, Xasan Albasri wuxuu yidhi: Alle Ayaan ku dhaartaye tadabburka iyo fiirfiirintu ma aha xuruuftoo la xafido, xuduuddiisana la dayaco, lana dhaho quraankaan akhriyey isaguna ka muuqan khuluq iyo camal. Ibnu Abii Xaatim. **[Saad: 26-29].**

وَوَهَبْنَا لِدَاوُۥدَ سُلَيْمَٰنَ ۚ نِعْمَ ٱلْعَبْدُ إِنَّهُۥٓ أَوَّابٌ ﴿٣٠﴾

30. Waxaan siinnay Nabi Daa'uud (wiilkiisii) suleymaan ahaa, wuxuuna ahaa addeec (Alle) oo fiican oo toobad keen badan.

إِذْ عُرِضَ عَلَيْهِ بِٱلْعَشِىِّ ٱلصَّٰفِنَٰتُ ٱلْجِيَادُ ﴿٣١﴾

31. Xusuuso marka loo bandhigay casarkii fardihii saddex ku hoganaayey (taasoo muujineysa fudayd iyo orod badnaan) ee fiicfiicnaa.

فَقَالَ إِنِّىٓ أَحْبَبْتُ حُبَّ ٱلْخَيْرِ عَن ذِكْرِ رَبِّى حَتَّىٰ تَوَارَتْ بِٱلْحِجَابِ ﴿٣٢﴾

32. Oo markaas uu salaaddiisii kaga mashquulay yidhina: waxaan ka jeclaaday xusidda Alle xoolo (iyo fardo) inta qorraxdu ka dhacdo.

33. Ii soo celiya wuxuuna billaabay inuu ka taabto dhudhumada iyo luqunta (uu gawraco sadaqo darteed).

رُدُّوهَا عَلَيَّ ۖ فَطَفِقَ مَسْحًۢا بِٱلسُّوقِ وَٱلْأَعْنَاقِ ﴿٣٣﴾

34. Dhab ahaan yaan u fidmeynay (imtixaannay) Nabi Suleymaan, waxaanna ku tuurray kursigiisii jasad markaasuu toobad keeney.

وَلَقَدْ فَتَنَّا سُلَيْمَٰنَ وَأَلْقَيْنَا عَلَىٰ كُرْسِيِّهِۦ جَسَدًا ثُمَّ أَنَابَ ﴿٣٤﴾

35. Wuxuuna yidhi Allow ii dambi dhaaf ina sii xukun aan ku habbooneyn cid iga dambeeysa adaa bixin badane ahe.

قَالَ رَبِّ ٱغْفِرْ لِى وَهَبْ لِى مُلْكًا لَّا يَنۢبَغِى لِأَحَدٍ مِّنۢ بَعْدِىٓ ۖ إِنَّكَ أَنتَ ٱلْوَهَّابُ ﴿٣٥﴾

36. Waxaanna u sakhirrey dabeysha iyadoo ku socota amarkiisa iyadoo jilicsan meeshuu doono.

فَسَخَّرْنَا لَهُ ٱلرِّيحَ تَجْرِى بِأَمْرِهِۦ رُخَآءً حَيْثُ أَصَابَ ﴿٣٦﴾

37. Shayaadiinta (xaggeeda waxaan uga sakhirray) mid wax dhisid badan iyo mid dhunbasho badan (oo badda jowhar uga soo saara).

وَٱلشَّيَٰطِينَ كُلَّ بَنَّآءٍ وَغَوَّاصٍ ﴿٣٧﴾

38. Iyo kuwo kale oo ku xidhxidhan silsilado.

وَءَاخَرِينَ مُقَرَّنِينَ فِى ٱلْأَصْفَادِ ﴿٣٨﴾

39. (Waxaan ku nidhi) tan waa siismadannada ee bixi ama hayso xisaab la'aan.

هَٰذَا عَطَآؤُنَا فَٱمْنُنْ أَوْ أَمْسِكْ بِغَيْرِ حِسَابٍ ﴿٣٩﴾

40. Wuxuuna ku leeyahay agtannada dhawaansho iyo noqosho fiican.

وَإِنَّ لَهُۥ عِندَنَا لَزُلْفَىٰ وَحُسْنَ مَـَٔابٍ ﴿٤٠﴾

Nabi Suleeymaan wuxuu ka dambeeyey oo dhaxlay Nabi Daa'uud wuxuuna ahaa Nabi suubban, Alle na wuxuu u sakhiray makhluuqyadiisa, wuuna imtixaanay wuuna ku guuleystey imtixaankii, wuxuuna Alle siiyey xukun aan cid kale oo ka dambeeysa la siin, wax kasta oo qisa ah oo taaban sharaf Nabinnimada oo lagu shakiyana waa wax kama jiraan, fardahana wuxuu u gawracay sadaqo markey ka shuqliyeen daacadii. **[Saad: 30-40].**

41. Xusuuso addoonkeygi Ayuub ahaa markuu u dhawaaqay (baryey) Allehiis isagoo dhihi wuxuu i taabsiiyey shaydaan dhib iyo cadaab.

وَٱذْكُرْ عَبْدَنَآ أَيُّوبَ إِذْ نَادَىٰ رَبَّهُۥٓ أَنِّى مَسَّنِىَ ٱلشَّيْطَٰنُ بِنُصْبٍ وَعَذَابٍ ﴿٤١﴾

42. Waxaana ku nidhi ku garaac lugtaada (dhulka) waxaanna ku nidhi kani waa biyo meydhi ah qabowna lana cabbo.

ٱرْكُضْ بِرِجْلِكَ ۖ هَٰذَا مُغْتَسَلٌۢ بَارِدٌ وَشَرَابٌ ﴿٤٢﴾

43. Waxaanna siinnay carruurtiisii iyo kuwo kale oo la mid ah naxariis xaggannaga ka ahaatay iyo xusuus kuwa caqliga leh.

وَوَهَبْنَا لَهُۥٓ أَهْلَهُۥ وَمِثْلَهُم مَّعَهُمْ رَحْمَةً مِّنَّا وَذِكْرَىٰ لِأُو۟لِى ٱلْأَلْبَٰبِ ﴿٤٣﴾

44. Kuna qabo gacantaada xidhmo laamo ah kuna garaac hana jabinnin dhaarta, waxaanna ku ognahay inuu yahay samre addoon fiican ah toobadkeenna badan.

وَخُذْ بِيَدِكَ ضِغْثًا فَٱضْرِب بِّهِۦ وَلَا تَحْنَثْ ۗ إِنَّا وَجَدْنَٰهُ صَابِرًا ۚ نِّعْمَ ٱلْعَبْدُ إِنَّهُۥٓ أَوَّابٌ ﴿٤٤﴾

45. Xusuuso addoommadannadii (Nabi) Ibraahim iyo Nabi Isxaaq iyo Nabi Yacquub ee ku xoog badnaa cibaadada kuna arag dheeraa (xaqa).

وَٱذْكُرْ عِبَٰدَنَآ إِبْرَٰهِيمَ وَإِسْحَٰقَ وَيَعْقُوبَ أُو۟لِى ٱلْأَيْدِى وَٱلْأَبْصَٰرِ ﴿٤٥﴾

46. Annagaa u doorannay xusidda aakhiro.

إِنَّآ أَخْلَصْنَٰهُم بِخَالِصَةٍ ذِكْرَى ٱلدَّارِ ﴿٤٦﴾

47. Waxayna ka yihiin agtannada kuwo la doortay oo wanaagsan.

وَإِنَّهُمْ عِندَنَا لَمِنَ ٱلْمُصْطَفَيْنَ ٱلْأَخْيَارِ ﴿٤٧﴾

48. Xusuusana Nabi Ismaaciil, Alyasac iyo Dul Kifli, dhammaanna waxay ahaayeen kuwo wanaagsan.

وَٱذْكُرْ إِسْمَٰعِيلَ وَٱلْيَسَعَ وَذَا ٱلْكِفْلِ ۖ وَكُلٌّ مِّنَ ٱلْأَخْيَارِ ﴿٤٨﴾

Nabi Ayuub Alle wuu imtixaamay, Alle na waa ka fayday kurbadii markuu si dhab ah u baryey, cid kastoo Alle si toosan iyo xaq ah ugu xidhnaatana Alle wuu aqbali ducadiisa, sidoo kale waxaa Alle doortey Nabi Ibraahim iyo Nabi Isxaaq, Nabi Yacquub, Nabi Ismaaciil, Yasac iyo Dulkifli dhammaan waxay ahaayeen ikhyaar la doortey, waana in wanaagga iyo adkeysiga lagaga daydaa, xaqana iyo quraankana la raaco. **[Saad: 41-48].**

49. Waxaas la soo sheegey waa xusuus, kuwa dhowrsadana waxaa u sugnaaday noqosho fiican.

هَٰذَا ذِكْرٌ ۚ وَإِنَّ لِلْمُتَّقِينَ لَحُسْنَ مَـَٔابٍ ﴿٤٩﴾

50. Jannada cadnin oo loo furay albaabada yey mudan.

جَنَّٰتِ عَدْنٍ مُّفَتَّحَةً لَّهُمُ ٱلْأَبْوَٰبُ ﴿٥٠﴾

51. Waxayna ku dangiigsan dhexdeeda (sariiro) waxayna u yeedhaan faakihad badan iyo cabid.

مُتَّكِـِٔينَ فِيهَا يَدْعُونَ فِيهَا بِفَٰكِهَةٍ كَثِيرَةٍ وَشَرَابٍ ﴿٥١﴾

52. Waxaana agtooda ahaan haween indhahoodu ku kooban yahay raggooda (dhowrsoon) oo isla eg (xagga da'da).

* وَعِندَهُمْ قَٰصِرَٰتُ ٱلطَّرْفِ أَتْرَابٌ ﴿٥٢﴾

53. Kaas waa waxa leydiin yaboohay maalinta xisaabta (qiyaamada).

هَٰذَا مَا تُوعَدُونَ لِيَوْمِ ٱلْحِسَابِ ﴿٥٣﴾

54. Kaasuna waa rizqigannaga mana dhammaado.

إِنَّ هَٰذَا لَرِزْقُنَا مَا لَهُۥ مِن نَّفَادٍ ﴿٥٤﴾

55. Xaalku waa sidaas, gaalana waxaa u sugnaadey noqosho xun.

هَٰذَا ۚ وَإِنَّ لِلطَّٰغِينَ لَشَرَّ مَـَٔابٍ ﴿٥٥﴾

56. Jahannamo yeyna gali iyadaana u xun gogol.

جَهَنَّمَ يَصْلَوْنَهَا فَبِئْسَ ٱلْمِهَادُ ﴿٥٦﴾

57. Kaas waa cadaab, ee dhadhamiya isagoo ah biyo iyo dhaacaanka ehelu naarka.

هَٰذَا فَلْيَذُوقُوهُ حَمِيمٌ وَغَسَّاقٌ ﴿٥٧﴾

وَءَاخَرُ مِن شَكْلِهِۦٓ أَزْوَٰجٌ ﴿٥٨﴾

58. Iyo mid kale oo cadaab ah oo noocya ah.

هَٰذَا فَوْجٌ مُّقْتَحِمٌ مَّعَكُمْ لَا مَرْحَبًۢا بِهِمْ ۚ إِنَّهُمْ صَالُوا۟ ٱلنَّارِ ﴿٥٩﴾

59. Malaa'igtuna waxay dhihi kani waa koox idinla gali cadaabka waxayna ku dhihi ha soo dhawaannina, waxayna galaan naarta.

Aayadaha hore waxay ka warrami ehelu jannaha iyo sida Alle ugu nimceeyey, oo wax kastoo khayr ah u helayaan, sidoo kale waxay ka warrami aayadaha kale xaalka ehelu naarka iyo sida loo dulleeyn, iyo waxay isu odhan iyo cadaabka kala duwan oy la kulmi, Nabiguna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee): haddii wadaan qasaaq ah aduunka lagu daadiyo adduunyadu way uri laheyd, waxaa wariyey Tirmadi iyo Axmed. Mana xoog badna. **[Saad: 49-59]**.

قَالُوا۟ بَلْ أَنتُمْ لَا مَرْحَبًۢا بِكُمْ ۖ أَنتُمْ قَدَّمْتُمُوهُ لَنَا ۖ فَبِئْسَ ٱلْقَرَارُ ﴿٦٠﴾

60. Waxay ku dhaheen kuwii raacay kuwii madaxda ahaa ha soo dhawaannina (wanaag halla kulmina) idinkaa na soo galiyey cadaabkan, isagaana u xun meel lagu nagaado.

قَالُوا۟ رَبَّنَا مَن قَدَّمَ لَنَا هَٰذَا فَزِدْهُ عَذَابًا ضِعْفًا فِى ٱلنَّارِ ﴿٦١﴾

61. Waxayna dheheen kuwii wax raacay Allow ruuxii na soo galiyey cadaabkan u siyaadi laban laab naarta.

وَقَالُوا۟ مَا لَنَا لَا نَرَىٰ رِجَالًا كُنَّا نَعُدُّهُم مِّنَ ٱلْأَشْرَارِ ﴿٦٢﴾

62. Waxayna dhaheen (madaxdii) gaalada maxaan la arki weyney rag aan ku tirinnay kuwo xun xun.

أَتَّخَذْنَٰهُمْ سِخْرِيًّا أَمْ زَاغَتْ عَنْهُمُ ٱلْأَبْصَٰرُ ﴿٦٣﴾

63. Ma waxaan ka yeelannay (adduunkii) jees jees mise waxaa ka iishey xaggooda araggii.

إِنَّ ذَٰلِكَ لَحَقٌّ تَخَاصُمُ أَهْلِ ٱلنَّارِ ﴿٦٤﴾

64. Kaasina (dooddaas) waa xaq sugan oo ah doodda ehelu naarka.

65. Waxaad dhahdaa Nabiyow waxaan uun ahay dige, ilaah xaq lugu caabudo oon Allaah ahayn ma jiro ee kaliga ah awooddana badnaa.

قُلْ إِنَّمَآ أَنَا۠ مُنذِرٌ ۖ وَمَا مِنْ إِلَٰهٍ إِلَّا ٱللَّهُ ٱلْوَٰحِدُ ٱلْقَهَّارُ ﴿٦٥﴾

66. Ee ah Rabbiga samooyinka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeyaba, ahna adkaade dambidhaaf badan.

رَبُّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا ٱلْعَزِيزُ ٱلْغَفَّارُ ﴿٦٦﴾

Aayadaha hore waxay ku xidhan yihiin kuwii ka horreeyey ee ku saabsanaa muranka iyo calaacalka ehelu naarka maalinta qiyaame iyo sidey kuwii xumaanta wax ku raacay iyo kuway raaceenba isu dagaalayaan midba midka kale, iyo iney gafsanaayeen markey ku jees jeesayeen adduunkii mu'miniinta sida Bilaal, Suhayb, Cammaar iyo wixii la mid ahaa. Aayadaha dambana waxay ka warami awoodda Alle iyo kalinnimadiisa iyo in isagu koonka leeyahey, Nabiguna u digaha caalamka yahay. **[Saad: 60-66].**

67. Waxaad dhahdaa Nabiyow quraanku waa war weyn.

قُلْ هُوَ نَبَؤٌا۟ عَظِيمٌ ﴿٦٧﴾

68. Ood idinku ka jeedsaneysaan.

أَنتُمْ عَنْهُ مُعْرِضُونَ ﴿٦٨﴾

69. Mana ogayn shirka sare (malaa'igtu) markey doodayaan (haddaan waxyi jirin).

مَا كَانَ لِىَ مِنْ عِلْمٍۭ بِٱلْمَلَإِ ٱلْأَعْلَىٰٓ إِذْ يَخْتَصِمُونَ ﴿٦٩﴾

70. Waxaa uun ley waxyoodey inaan ahay dige muuqda.

إِن يُوحَىٰٓ إِلَىَّ إِلَّآ أَنَّمَآ أَنَا۠ نَذِيرٌ مُّبِينٌ ﴿٧٠﴾

71. Xusuuso markuu Alle ku yidhi malaa'igta anigu waxaan ka abuuri dadka (Aadam) dhoobo.

إِذْ قَالَ رَبُّكَ لِلْمَلَٰٓئِكَةِ إِنِّى خَٰلِقٌۢ بَشَرًا مِّن طِينٍ ﴿٧١﴾

72. Ee markaan ekeeyo oon ku afuufo ruuxdeyda ugu dhaca sujuud (salaam).

فَإِذَا سَوَّيْتُهُۥ وَنَفَخْتُ فِيهِ مِن رُّوحِى فَقَعُوا۟ لَهُۥ سَٰجِدِينَ ﴿٧٢﴾

73. Wayna sujuuddey malaa'igtii dhammaantood oo idil.

فَسَجَدَ ٱلْمَلَٰٓئِكَةُ كُلُّهُمْ أَجْمَعُونَ ﴿٧٣﴾

إِلَّآ إِبۡلِيسَ ٱسۡتَكۡبَرَ وَكَانَ مِنَ ٱلۡكَٰفِرِينَ ﴿٧٤﴾

74. Ibliis mooyee oo is kibriyey kana mid noqday gaalada.

قَالَ يَٰٓإِبۡلِيسُ مَا مَنَعَكَ أَن تَسۡجُدَ لِمَا خَلَقۡتُ بِيَدَيَّۖ أَسۡتَكۡبَرۡتَ أَمۡ كُنتَ مِنَ ٱلۡعَالِينَ ﴿٧٥﴾

75. Alle wuxuu yidhi Ibliisow maxaa kaa reebay inaad u sujuuddo kaan ku abuuray labadayda gacmood, ma is kibrisey mise waxaad ka mid noqotay kuwa isla sarreeya.

قَالَ أَنَا۠ خَيۡرٞ مِّنۡهُ خَلَقۡتَنِي مِن نَّارٖ وَخَلَقۡتَهُۥ مِن طِينٖ ﴿٧٦﴾

76. Wuxuuna yidhi anaa ka kheyrroon isaga (Aadam), waxaad iga abuurtey naar isagana waxaad ka abuurtey dhoobo.

قَالَ فَٱخۡرُجۡ مِنۡهَا فَإِنَّكَ رَجِيمٞ ﴿٧٧﴾

77. Alle wuxuu ku yidhi: iiga bax jannadeyda, waxaad tahay mid la dheereeyeye.

وَإِنَّ عَلَيۡكَ لَعۡنَتِيٓ إِلَىٰ يَوۡمِ ٱلدِّينِ ﴿٧٨﴾

78. Korkaagana ha ahaato lacanade tan iyo maalinta abaalmarinta.

Quraanku waa war weyn gaaladuna waa ka jeedsadeen Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) waa uun dige cad oo waxyi Alle wax lagu ogeysiiyey. Waxaa kale ooy aayaduhu ka warameen Nabi Aadam (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) iyo Ibliis sida meelo badan quraanku ku sheegey, taasoo ah inuu Ibliis iskibriyey xaqana diiday amarkii Alle na ka madax adaygay waxaana lagu abaal mariyey in naxariistii Alle laga dheereeyey Alle na u cadhooday cid kastoo raacda oo xaqa iska weyneysana waxay mudan wuxuu mutay Ibliis. **[Saad: 67-78].**

قَالَ رَبِّ فَأَنظِرۡنِيٓ إِلَىٰ يَوۡمِ يُبۡعَثُونَ ﴿٧٩﴾

79. Wuxuu yidhi (Ibliis): Allow i sug tan iyo maalinta la soo bixin dadka.

قَالَ فَإِنَّكَ مِنَ ٱلۡمُنظَرِينَ ﴿٨٠﴾

80. Alle wuxuu yidhi waxaad ka mid tahay kuwa la sugi.

إِلَىٰ يَوۡمِ ٱلۡوَقۡتِ ٱلۡمَعۡلُومِ ﴿٨١﴾

81. Tan iyo maalinta waqtiga la yaqaan ah.

82. Wuxuuna yidhi: waxaan ku dhaartey sharaftaadee waan baadiyeyn dhammaantood.

قَالَ فَبِعِزَّتِكَ لَأُغْوِيَنَّهُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٨٢﴾

83. Marka laga reebo addoommadaada suubban.

إِلَّا عِبَادَكَ مِنْهُمُ ٱلْمُخْلَصِينَ ﴿٨٣﴾

84. Alle wuxuu yidhi dhabtaan ku sifoobaa, dhabtaanna u hadlaa.

قَالَ فَٱلْحَقُّ وَٱلْحَقَّ أَقُولُ ﴿٨٤﴾

85. Waxaana ku dhaaran inaan ka buuxiyo jahannamo adiga iyo inta ku raacda oo ka mid ah dadka dhammaan.

لَأَمْلَأَنَّ جَهَنَّمَ مِنكَ وَمِمَّن تَبِعَكَ مِنْهُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٨٥﴾

86. Waxaad dhahdaa Nabiyow: idin kama warsanaayo xaqa ujuuro, mana ihi kuwa is dhiba (isku dhiba waxaan la farin).

قُلْ مَآ أَسْـَٔلُكُمْ عَلَيْهِ مِنْ أَجْرٍ وَمَآ أَنَا۠ مِنَ ٱلْمُتَكَلِّفِينَ ﴿٨٦﴾

87. Waxyiguna waxaan waanada caalamka ahayn ma aha.

إِنْ هُوَ إِلَّا ذِكْرٌ لِّلْعَٰلَمِينَ ﴿٨٧﴾

88. Dhab ahaanna waxaad u ogaan doontaan warkiisa muddo ka dib.

وَلَتَعْلَمُنَّ نَبَأَهُۥ بَعْدَ حِينٍۭ ﴿٨٨﴾

Xigmo Alle ogyahay yuu u oggolaaday codsigii Ibliis oo ahaa in cimriga loo dheereeyo. Wuxuuna ku dhaartey colkaas inuu dadka dhumiyo marka laga reebo kuwa wanaagsan. Alle na wuxuu ku ballan qaaday inuu cadaabo Ibliis iyo inta raacdaba. Tan kale ma aha mana habboona iney noqoto diintu wax ujuuro iyo cunno lagu warsado, lana sheegto waxaanan aheyn, ama leysku dhibo waxaan lagu farin. Quraankuna waa waanada iyo naxariista adduunka oo dhan, ayna waajib tahay in la raaco laguna dhaqmo, haddii kale waxaa dhab ahaan loo ogaan warkiisa. **[Saad: 79-88].**

Suurat Az-Zumar

سُورَةُ الزُّمَرِ

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

تَنزِيلُ ٱلْكِتَٰبِ مِنَ ٱللَّهِ ٱلْعَزِيزِ ٱلْحَكِيمِ ﴿١﴾

1. Soo dajinta kitaabka (quraanka) wuxuu ka ahaadey xagga Allaha adkaada ee falka san.

إِنَّآ أَنزَلْنَآ إِلَيْكَ ٱلْكِتَٰبَ بِٱلْحَقِّ فَٱعْبُدِ ٱللَّهَ مُخْلِصًا لَّهُ ٱلدِّينَ ﴿٢﴾

2. Annagaana kuugu soo dajinnay Nabiyow kitaabka si xaq ah, ee caabud Alle adoo u kali yeeli diinta.

أَلَا لِلَّهِ ٱلدِّينُ ٱلْخَالِصُ ۚ وَٱلَّذِينَ ٱتَّخَذُوا۟ مِن دُونِهِۦٓ أَوْلِيَآءَ مَا نَعْبُدُهُمْ إِلَّا لِيُقَرِّبُونَآ إِلَى ٱللَّهِ زُلْفَىٰٓ إِنَّ ٱللَّهَ يَحْكُمُ بَيْنَهُمْ فِى مَا هُمْ فِيهِ يَخْتَلِفُونَ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَهْدِى مَنْ هُوَ كَٰذِبٌ كَفَّارٌ ﴿٣﴾

3. Diinta khaaliska ahna waxay u sugnaatey Alle, kuwa ka yeesha Alle ka sokow awliyo waxay odhan uma caabudno inay Alle noo dhaweeyaan mooyee dhawaansho, Alle ayaana kala xukumi dadka dhexdooda waxay isku diiddanaayeen, Alle na ma hanuuniyo been badane gaalnimo badan.

لَّوْ أَرَادَ ٱللَّهُ أَن يَتَّخِذَ وَلَدًا لَّٱصْطَفَىٰ مِمَّا يَخْلُقُ مَا يَشَآءُ ۚ سُبْحَٰنَهُۥ ۖ هُوَ ٱللَّهُ ٱلْوَٰحِدُ ٱلْقَهَّارُ ﴿٤﴾

4. Hadduu doono Alle inuu yeesho ilmo wuxuu ka dooran lahaa wuxuu abuuro wuxuu doono, waa nazahan yahey, waana Allaha kalida ah ee awoodda badan.

خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ بِٱلْحَقِّ ۖ يُكَوِّرُ ٱلَّيْلَ عَلَى ٱلنَّهَارِ وَيُكَوِّرُ ٱلنَّهَارَ

5. Isagaa abuuray samooyinka iyo dhulkaba si dhab ah, wuxuuna habeenka ku daboolaa

maalinta, maalintana ku daboolaa habeenka, wuxuuna sakhiray qorraxda iyo dayaxa, mid walbana wuxuu ku socdaa muddo magacaaban, Alle na waa adkaade dambi dhaaf badan.

عَلَى ٱلَّيۡلِۖ وَسَخَّرَ ٱلشَّمۡسَ وَٱلۡقَمَرَۖ كُلّٞ يَجۡرِي لِأَجَلٖ مُّسَمّٗىۗ أَلَا هُوَ ٱلۡعَزِيزُ ٱلۡغَفَّٰرُ ٥

Alle wuxuu ka warramey sida meelo badan aan ku soo marray sharafta quraanka iyo weynidiisaba, maxaa yeeley waxaa soo dajiyey oo ku hadley Allaha weyn ee xigmada badan, sidaas daraaddeed yey waajib tahay in la raaco quraankaas Alle na si dhab ah loo caabudo, ciddii caabudda wax isaga ka soo hadhayna waxay la kulmi khasaare iyo qoomammo, maxaa yeeley Alle waxaa loogu dhawaadaa camal fiican, mana liibaano beenaale iyo gaal midna. Alle na waa ka kaaftoon yahay inuu yeesho ilmo, hadduu doonana waxuuu ka yeelan lahaa wuxuu rabo, waase ka nasahan yahay umana baahna, maxaa yeeley waa Allaha awoodda leh ee abuuray cirka, dhulka, habeenka, maalinta, qorraxda iyo dayaxaba, dhammaantoodna u sakhirey sidii loo abuurey. **[Az-Zumar: 1-5].**

6. Wuxuu idinka abuurey naf kaliya (Nabi Aadam) markaasuu Alle ka yeeley (ka abuurey) xagga Aadam haweeneydiisi (Xaawo) wuxuuna Alle idiin soo dajiyey xoolaha siddeed nooc oo ka mid ah, wuxuuna idinku abuurey uurka hooyadiin abuurid ka dambeyso abuurid saddex mugdi dhexdooda saasna waxaa yeela Allaha idin barbaariya, isagaana iska leh xukunka, macbuud xaq ah ma jiro Allaah mooye, ee xaggee laydiinka iili (xaqa).

خَلَقَكُم مِّن نَّفۡسٖ وَٰحِدَةٖ ثُمَّ جَعَلَ مِنۡهَا زَوۡجَهَا وَأَنزَلَ لَكُم مِّنَ ٱلۡأَنۡعَٰمِ ثَمَٰنِيَةَ أَزۡوَٰجٖۚ يَخۡلُقُكُمۡ فِي بُطُونِ أُمَّهَٰتِكُمۡ خَلۡقٗا مِّنۢ بَعۡدِ خَلۡقٖ فِي ظُلُمَٰتٖ ثَلَٰثٖۚ ذَٰلِكُمُ ٱللَّهُ رَبُّكُمۡ لَهُ ٱلۡمُلۡكُۖ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَۖ فَأَنَّىٰ تُصۡرَفُونَ ٦

7. Haddaad gaalowdaan dadow Alle waa idinka kaaftoomey, ugamana raalli aha addoommadiisa gaalnimo, haddaad ku mahdisaanna wuu idin ka raalli noqon, nafna naf kale danbigeeda

إِن تَكۡفُرُواْ فَإِنَّ ٱللَّهَ غَنِيٌّ عَنكُمۡۖ وَلَا يَرۡضَىٰ لِعِبَادِهِ ٱلۡكُفۡرَۖ وَإِن تَشۡكُرُواْ يَرۡضَهُ لَكُمۡۗ وَلَا تَزِرُ وَازِرَةٞ وِزۡرَ أُخۡرَىٰۚ ثُمَّ إِلَىٰ رَبِّكُم مَّرۡجِعُكُمۡ

ma qaaddo, waxaana leydiin celin Allihiin xaggiisa, wuxuuna idiin ka warrami waxaad camal fasheen, wuuna ogyahey waxa laabta (qalbiga) ku sugan.

فَيُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ۚ إِنَّهُۥ عَلِيمٌۢ بِذَاتِ ٱلصُّدُورِ ﴿٧﴾

8. Markuu dadka taabto dhib wuxuu baryaa Allehiis isagoo u noqon, mar kuuse nicmo siiyo wuu illoobaa wuxuu baryey horey, wuxuuna u yeelaa Alle shariigyo si uu uga baadiyeeyo (kaasi) jidka Alle, waxaad dhahdaa ku raaxayso gaalnimadaada wax yar waxaad ka mid tahay ehelu naarke.

* وَإِذَا مَسَّ ٱلْإِنسَٰنَ ضُرٌّ دَعَا رَبَّهُۥ مُنِيبًا إِلَيْهِ ثُمَّ إِذَا خَوَّلَهُۥ نِعْمَةً مِّنْهُ نَسِىَ مَا كَانَ يَدْعُوٓا۟ إِلَيْهِ مِن قَبْلُ وَجَعَلَ لِلَّهِ أَندَادًا لِّيُضِلَّ عَن سَبِيلِهِۦ ۚ قُلْ تَمَتَّعْ بِكُفْرِكَ قَلِيلًا إِنَّكَ مِنْ أَصْحَٰبِ ٱلنَّارِ ﴿٨﴾

Wuxuu Alle halkan ku taxay nicmooyin badan oos u nicmeeyey addoommadiisa, taasoo ah abuuriddiisa xoolaha uu inoo abuurey, uurka hooyoo innagu nooleeyey innaguna abuuray mugdiyo saddex ah dhexdood, hadduu dadkoo dhan gaaloobana Alle wax ma yeeleyso, mana rabo gaalnimo mahaddoodana wuu jecel yahay nafina mid kale dambigeed ma qaaddo, xagga Alle ayaana loo noqon ruux walbana wuxuu uga warrami wuxuu camal faley, illeen wax walba waa ogyahay, mana habboona in dhibkana Alle la xusuusto ladnaantana la halmaamo loona yeelo shariigyo, cidda saas yeeshana waxyar bey aduunka ku raaxaysan naarna way gali. **[Az-Zumar: 6-8].**

9. Ruux tukan oo Alle adeeca saacadaha habeenka isagoo sujuudsan oo taagan kana digtoon aakhiro quudarreynayana naxariista Allehiis (ma la mid baa cidaan saas faleynin). Waxaad dhahdaa: Nabiyow ma eg yihiin kuwa wax yaqaanna iyo kuwaan wax aqoonnin, waxaa uun waantoomi kuwa caqliga leh.

أَمَّنْ هُوَ قَٰنِتٌ ءَانَآءَ ٱلَّيْلِ سَاجِدًا وَقَآئِمًا يَحْذَرُ ٱلْءَاخِرَةَ وَيَرْجُوا۟ رَحْمَةَ رَبِّهِۦ ۗ قُلْ هَلْ يَسْتَوِى ٱلَّذِينَ يَعْلَمُونَ وَٱلَّذِينَ لَا يَعْلَمُونَ ۗ إِنَّمَا يَتَذَكَّرُ أُو۟لُوا۟ ٱلْأَلْبَٰبِ ﴿٩﴾

قُلْ يَٰعِبَادِ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱتَّقُواْ رَبَّكُمْۚ لِلَّذِينَ أَحْسَنُواْ فِي هَٰذِهِ ٱلدُّنْيَا حَسَنَةٌۗ وَأَرْضُ ٱللَّهِ وَٰسِعَةٌۗ إِنَّمَا يُوَفَّى ٱلصَّٰبِرُونَ أَجْرَهُم بِغَيْرِ حِسَابٍ ﴿١٠﴾

10. Waxaad dhahdaa Nabiyow addoommadeyda xaqa rumeeyow ka dhowrsada Allihiin, ciddii wanaag fashana addoommadeyda waxaa u sugnaadey wanaag, dhulka Alle na waa waasac (ee ku caabuda) waxaa uun loo oofiyaa (dhammeeyaa) kuwa samra ajrigooda xisaab la'aan.

قُلْ إِنِّيٓ أُمِرْتُ أَنْ أَعْبُدَ ٱللَّهَ مُخْلِصًا لَّهُ ٱلدِّينَ ﴿١١﴾

11. Waxaad dhahdaa Nabiyow waxaa lay faray inaan caabudo Alle anoo u kali yeeli diinta.

وَأُمِرْتُ لِأَنْ أَكُونَ أَوَّلَ ٱلْمُسْلِمِينَ ﴿١٢﴾

12. Waxaana ley faray inaan noqdo kan ugu horreeya muslimiinta.

Dhab ahaan ma sinna mana eka ruux Alle ka yaaba kuna dadaala khayrka iyo wanaagga iyo mid xumaanta qasta oon Alleba xusuusan, sideyna u ekeyn ruux cilmi wax anfaca oos Alle ugu dhawaado yaqaan iyo mid jaahil ah oon wax aqoon iskana dhaga la' sidoo kale ma eka ruux caqli badan oo Alle iyo abaalmarintiisa xusuusan iyo midaan xilba iska saarin. Alle na wuxuu faray addoommadiisa inay ka dhawrsadaan, wanaagna falaan si ay wanaagga u helaan, samirkooda ajirkiisana xisaab la'aan loogu oofiyo, caabudiddana loo kali yeelo Alle isagoo lagu dayan Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) madaxda iyo hanuunka u ahaa ummadda. Imaam Awsaaci wuxuu yidhi: kuwa samra ajriga looma miisaamo loomana miiso ee waa loo daraa. **[Az-Zumar: 9-12].**

قُلْ إِنِّيٓ أَخَافُ إِنْ عَصَيْتُ رَبِّي عَذَابَ يَوْمٍ عَظِيمٍ ﴿١٣﴾

13. Waxaad dhahdaa Nabiyoow anigu waxaan ka cabsan haddaan caasiyo Rabbigay cadaab maalin weyn.

قُلِ ٱللَّهَ أَعْبُدُ مُخْلِصًا لَّهُۥ دِينِي ﴿١٤﴾

14. Waxaad dhahdaa Alle uun baan caabudi anoo u kali yeeli diintayda.

15. Ee caabuda gaaloy waxaad doontaan Alle ka sokow, waxaadna dhahdaa kuwa khasaaray waa kuwa khasaaray naftooda iyo ehelkoodii maalinta qiyaame, taasina waa khasaaraha cad.

فَٱعۡبُدُواْ مَا شِئۡتُم مِّن دُونِهِۦۗ قُلۡ إِنَّ ٱلۡخَٰسِرِينَ ٱلَّذِينَ خَسِرُوٓاْ أَنفُسَهُمۡ وَأَهۡلِيهِمۡ يَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِۗ أَلَا ذَٰلِكَ هُوَ ٱلۡخُسۡرَانُ ٱلۡمُبِينُ ١٥

16. Korkooda waxaa ah lakabyo naar ah, hoostoodana waxaa ah lakabyo (hoosyaal) naar ah, kaasina waa waxa Alle ku cabsi galiyo (ugu digo) addoommadiisa ee addoommadeydoow iga dhawrsada.

لَهُم مِّن فَوۡقِهِمۡ ظُلَلٞ مِّنَ ٱلنَّارِ وَمِن تَحۡتِهِمۡ ظُلَلٞۚ ذَٰلِكَ يُخَوِّفُ ٱللَّهُ بِهِۦ عِبَادَهُۥۚ يَٰعِبَادِ فَٱتَّقُونِ ١٦

17. Kuwa ka fogaaday inay caabudaan shaydaan (iyo xuma fare) oo Alle u noqday waxaa u sugnaaday bishaaro ee u bishaaree addoommadayda.

وَٱلَّذِينَ ٱجۡتَنَبُواْ ٱلطَّٰغُوتَ أَن يَعۡبُدُوهَا وَأَنَابُوٓاْ إِلَى ٱللَّهِ لَهُمُ ٱلۡبُشۡرَىٰۚ فَبَشِّرۡ عِبَادِ ١٧

18. Ee ah kuwa dhageysta hadalka oo raaca kiisa fiican, kuwaasna waa kuwa Alle hanuuniyey, kuwaasna iyaga uun baa ah kuwa caqliga leh.

ٱلَّذِينَ يَسۡتَمِعُونَ ٱلۡقَوۡلَ فَيَتَّبِعُونَ أَحۡسَنَهُۥٓۚ أُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ هَدَىٰهُمُ ٱللَّهُۖ وَأُوْلَٰٓئِكَ هُمۡ أُوْلُواْ ٱلۡأَلۡبَٰبِ ١٨

Hadduu Alle faray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) inuusan Alle khilaafin cibaadadana u kali yeelo waxay ku tusin inuu dadka kalena ka daran yahay, jidkuna waa cad yahay cid walbana waa aragtaa, waxaase khasaara dhab ah ku dhacday kuwa ay kala tagaan isna waayaan ehelkoodii maalinta qiyaame naarna galaan, waana khasaare mid la mid ah uusan jirin mar hadday naaru kor iyo hoosba ka koobtay, kuwa mu'miniinta dhabta ah ee caqliga badan bishaarada muta waa kuwaan raacin caabudinna wax Alle ka soo hadhay oo shaydaan kasta ah iyo wax kastoon xaq ahayn, aayadduna waxay ka digi in xumaan leysku raaco. Ibnu Cabaas waxaa laga wariyey: kuwaasi waa kuwa markey maqlaan xumaan iyo samaan ka warrama samaanta, kana taga xumaanta oon ka sheekeeynin. **[Az-Zumar: 13-18].**

أَفَمَنْ حَقَّ عَلَيْهِ كَلِمَةُ ٱلْعَذَابِ أَفَأَنتَ تُنقِذُ مَن فِى ٱلنَّارِ ﴿١٩﴾

19. Ruuxay u waajibtay ereyga cadaab ma adaa Nabiyoow ka korin (oo badbaadin) cid naar gali.

لَٰكِنِ ٱلَّذِينَ ٱتَّقَوْا۟ رَبَّهُمْ لَهُمْ غُرَفٌ مِّن فَوْقِهَا غُرَفٌ مَّبْنِيَّةٌ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ ۖ وَعْدَ ٱللَّهِ لَا يُخْلِفُ ٱللَّهُ ٱلْمِيعَادَ ﴿٢٠﴾

20. Kuwa ka dhawrsaday Rabbigoodse waxay mudan qawlado (janno) oo qawlada kale ka korreeyaan si fiicanna (u dhisan), waxaana dhexsocda wabiyaalkii, waana yabooh Alle, mana baajiyo Alle yaboohiisa.

أَلَمْ تَرَ أَنَّ ٱللَّهَ أَنزَلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَسَلَكَهُۥ يَنَٰبِيعَ فِى ٱلْأَرْضِ ثُمَّ يُخْرِجُ بِهِۦ زَرْعًا مُّخْتَلِفًا أَلْوَٰنُهُۥ ثُمَّ يَهِيجُ فَتَرَىٰهُ مُصْفَرًّا ثُمَّ يَجْعَلُهُۥ حُطَٰمًا ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَذِكْرَىٰ لِأُو۟لِى ٱلْأَلْبَٰبِ ﴿٢١﴾

21. Miyaadan arkeyn in Alle ka soo dajiyey samada biyo oo markaas uu galin dhulka iyagoo ka soo burqan dhulka, markaasna Alle ku soo bixin beer midabkeedu kala duwan yahay markaas ka dibna uu engegi ood arki isagoo cawlan, kadibna ka yeeli bur bur, arrintaasna waxay xusuus u tahay kuwa caqliga leh.

أَفَمَن شَرَحَ ٱللَّهُ صَدْرَهُۥ لِلْإِسْلَٰمِ فَهُوَ عَلَىٰ نُورٍ مِّن رَّبِّهِۦ ۚ فَوَيْلٌ لِّلْقَٰسِيَةِ قُلُوبُهُم مِّن ذِكْرِ ٱللَّهِ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ فِى ضَلَٰلٍ مُّبِينٍ ﴿٢٢﴾

22. Ruux Alle u waasiciyey laabtiisa islaamka oo nuurka Alle ku sugan ma la mid baa (mid la daboolay) halaag wuxuu u sugnaaday kuwey ka engegtay quluubtoodu xuska Alle (quraanka) kuwaasina waa kuwa baadi cad ku sugan.

Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) wuxuu Alle faray inuu dadka xaqa gaadhsiiyo, korkiisase ma saarra inuu xoog wax ku hanuuniyo ama cid naaru u waajibtay koriyo, kuwa Alle ka dhawrsadase waxay mudan wanaag iyo darajooyin janno, Alle na ma baajiyo yaboohiisa. Awoodda Alle na waxaa

ku tusin siduu roobka u keeno cunnana ugu soo bixiyo, arintaasina waa waxay ku waana qaataan kuwa caqliga badan. Ruuxii Alle hanuuniyana oo qalbiga u waasiciyo la mid ma aha mid dhumay. Ibnu Kathiir wuxuu yidhi: waxaa liibaanay ruuxii xaalkiisu wanaag ku dhammaado. **[Az-Zumar: 19-22].**

23. Alle ayaa soo dejiyey kan ugu fiican hadal, kitaabuu soo dajiyey isu eg oo soo noqnoqda, ay lana qamandhacyooto jidhka kuwa ka yaaba Rabbigood, markaasay la jilci jidhkoodu iyo quluubtoodu xusuusta Alle, arrintaasuna waa hanuunka Alle uu ku hanuuniyo cidduu doono, ruuxuu Alle dhumiyana ma jiro cid hanuunin.

ٱللَّهُ نَزَّلَ أَحۡسَنَ ٱلۡحَدِيثِ كِتَٰبٗا مُّتَشَٰبِهٗا مَّثَانِيَ تَقۡشَعِرُّ مِنۡهُ جُلُودُ ٱلَّذِينَ يَخۡشَوۡنَ رَبَّهُمۡ ثُمَّ تَلِينُ جُلُودُهُمۡ وَقُلُوبُهُمۡ إِلَىٰ ذِكۡرِ ٱللَّهِۚ ذَٰلِكَ هُدَى ٱللَّهِ يَهۡدِي بِهِۦ مَن يَشَآءُۚ وَمَن يُضۡلِلِ ٱللَّهُ فَمَا لَهُۥ مِنۡ هَادٍ ٢٣

24. Ma ruux wajigiisa kaga gabbada cadaab xun maalinta qiyaame ma la mid baa mid aan saas ahayn, waxaana loo yidhaa daalimiinta dhadhamiya waxaad kasban jirteen (abaalkiisii).

أَفَمَن يَتَّقِي بِوَجۡهِهِۦ سُوٓءَ ٱلۡعَذَابِ يَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِۚ وَقِيلَ لِلظَّٰلِمِينَ ذُوقُواْ مَا كُنتُمۡ تَكۡسِبُونَ ٢٤

25. Waxaa beeniyey (xaqa) kuwii ka horreeyey (gaaladan) wuxuuna uga yimid cadaabku meelayan kasayn.

كَذَّبَ ٱلَّذِينَ مِن قَبۡلِهِمۡ فَأَتَىٰهُمُ ٱلۡعَذَابُ مِنۡ حَيۡثُ لَا يَشۡعُرُونَ ٢٥

26. Markaasuu Alle dhadhansiiyay dulli nolasha adduunyo, cadaabka aakhiraana weyn hadday wax garan.

فَأَذَاقَهُمُ ٱللَّهُ ٱلۡخِزۡيَ فِي ٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَاۖ وَلَعَذَابُ ٱلۡأٓخِرَةِ أَكۡبَرُۚ لَوۡ كَانُواْ يَعۡلَمُونَ ٢٦

Alle ayaa soo dajiyey quraan ugu fiican uguna run badan hadal isagoo isu eg soona noqnoqda akhriskiisana mu'miniintu la cabsato, kuna faraxdo, hanuunkuna wuxuu ku jiraa awoodda Alle ee weyn, waase in xaqa lagu dadaalo mana sinna ruux cadaabka waji waji ugu dhici iyo mid jannada ku dhex mushaaxi. Cid walbana waxay la kulmi waxay hormarsatay, daalimiintuna waxay mudan cadaab daran, gaaladuna ama ha horreeyo ama ha dambeeyee

waxaa caadadooda ka mid ah xaq diidiyo madax adeyg xun, miyeyse ka nabadgali ciqaabta Alle taasoo uga imaan meeleyn filayn iyo dulli adduun iyo aakhiroba, Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: gaalada waxaa lala aadi naarta iyagoo gacmuhu xidh xidhan yihiin markaasaa lagu tuuri naarta, wax naartu taabatana waxaa ugu horreeyn wajigooda. **[Az-Zumar: 23-26].**

27. Dhab ayaan ugu caddayney dadka quraanka tusaale kasta inay waantoobaan.

وَلَقَدْ ضَرَبْنَا لِلنَّاسِ فِي هَٰذَا ٱلْقُرْءَانِ مِن كُلِّ مَثَلٍ لَّعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ ﴿٢٧﴾

28. Waana quraan carabi ku (qoran) oon qallooc lahayn inay dhawrsadaan.

قُرْءَانًا عَرَبِيًّا غَيْرَ ذِي عِوَجٍ لَّعَلَّهُمْ يَتَّقُونَ ﴿٢٨﴾

29. Alle wuxuu qaddaray tusaale nin dad wadaagaan iskuna khilaafsan iyo mid u sugnaada ruux si gaar ah ma eg yihiin tusaale ahaan. Mahad Alle ayaa iska leh dadka badidiisna ma oga.

ضَرَبَ ٱللَّهُ مَثَلًا رَّجُلًا فِيهِ شُرَكَآءُ مُتَشَٰكِسُونَ وَرَجُلًا سَلَمًا لِّرَجُلٍ هَلْ يَسْتَوِيَانِ مَثَلًا ۚ ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ ۚ بَلْ أَكْثَرُهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٢٩﴾

30. Adigu waad dhiman iyaguna (gaaladu) way dhiman.

إِنَّكَ مَيِّتٌ وَإِنَّهُم مَّيِّتُونَ ﴿٣٠﴾

31. Markaas maalinta qiyaame waxaad ku doodaysaan Allihiin agtiisa.

ثُمَّ إِنَّكُمْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ عِندَ رَبِّكُمْ تَخْتَصِمُونَ ﴿٣١﴾

32. Yaa ka dulmi badan ruux ku been abuurtey Alle korkiisa oo beeniyey runta (xaqa) markuu u yimid, miyeyna ahayn jahannamo guriga gaalada.

* فَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّن كَذَبَ عَلَى ٱللَّهِ وَكَذَّبَ بِٱلصِّدْقِ إِذْ جَآءَهُۥٓ ۚ أَلَيْسَ فِي جَهَنَّمَ مَثْوًى لِّلْكَٰفِرِينَ ﴿٣٢﴾

33. Kii la yimid runta iyo kii rumeeyey waa dhawrsadeen.

وَٱلَّذِي جَآءَ بِٱلصِّدْقِ وَصَدَّقَ بِهِۦٓ ۙ أُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْمُتَّقُونَ ﴿٣٣﴾

34. Waxayna ku leeyihiin Alle agtiisa waxay doonaan taasina waa abaalmarinta kuwa wanaagga fala.

لَهُم مَّا يَشَآءُونَ عِندَ رَبِّهِمْ ۚ ذَٰلِكَ جَزَآءُ ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿٣٤﴾

لِيُكَفِّرَ ٱللَّهُ عَنْهُمْ أَسْوَأَ ٱلَّذِى عَمِلُوا۟
وَيَجْزِيَهُمْ أَجْرَهُم بِأَحْسَنِ ٱلَّذِى كَانُوا۟
يَعْمَلُونَ ﴿٣٥﴾

35. Si Alle uga asturo wixii xumaa oy camal faleen, kuna abaal mariyo ajirkii ugu fiicnaa waxay falayeen.

Quraankan wax badan baa lagu soo cel celiyay caddaymo iyo tusaalooyin badan si loogu waantoomo, isagoo ah quraan fasiix ah carabina ku qoran mana sinna wax dad isdiiddan ka dhaxeeya iyo wax cid kali ah u gaar ah, saasayna u ekeyn mu'min iyo gaal iyo camalkooda, xaalkuna wuxuu ku dhammaan in la dhiman muslim iyo gaalba, markaas lagu doodi Alle agtiisa, wax la dulmi ahna ma jiro cid Alle ku been abuuratay xaqa u yimidna beenisay waxayna ku hoyan naarta jahannamo. Kiise xaqa la yimid oo ah Nabiga iyo Nabiyadii kale iyo kuwii rumeeyeyba waa kuwo Alle ka yaaba xumaantana ka dhawrsada waxayna mudan wanaag iyo sharaf, Rasuulkuna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee): waxaa la kicin qiyaamada madaxdoodii oo khaa'in ah waxaana la doodi dadkiisii wayna ka guuleysan markaasaa lagu odhan: waxaad awdaa dhan ka mid ah dhinacyada jahannamo (naarta gal). Waxaa wariyey Bazaar. **[Az-Zumar: 27-35].**

أَلَيْسَ ٱللَّهُ بِكَافٍ عَبْدَهُۥ ۖ
وَيُخَوِّفُونَكَ بِٱلَّذِينَ مِن دُونِهِۦ ۚ وَمَن
يُضْلِلِ ٱللَّهُ فَمَا لَهُۥ مِنْ هَادٍ ﴿٣٦﴾

36. Miyuusan ahayn Alle ku fillaha addoonkiisa, waxay kugu cabsi galin waxa Alle ka soo hadhay (ay caabudi) ruux Alle dhumiyeyna ma laha cid hanuunin.

وَمَن يَهْدِ ٱللَّهُ فَمَا لَهُۥ مِن مُّضِلٍّ ۗ
أَلَيْسَ ٱللَّهُ بِعَزِيزٍ ذِى ٱنتِقَامٍ ﴿٣٧﴾

37. Cid Alle hanuuniyeyna ma jiro wax dhumin, Alle na miyuusan ahayn adkaade aarsada.

وَلَئِن سَأَلْتَهُم مَّنْ خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ
وَٱلْأَرْضَ لَيَقُولُنَّ ٱللَّهُ ۚ قُلْ أَفَرَءَيْتُم
مَّا تَدْعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ إِنْ أَرَادَنِىَ
ٱللَّهُ بِضُرٍّ هَلْ هُنَّ كَٰشِفَٰتُ ضُرِّهِۦٓ
أَوْ أَرَادَنِى بِرَحْمَةٍ هَلْ هُنَّ مُمْسِكَٰتُ
رَحْمَتِهِۦ ۚ قُلْ حَسْبِىَ ٱللَّهُ ۖ عَلَيْهِ يَتَوَكَّلُ
ٱلْمُتَوَكِّلُونَ ﴿٣٨﴾

38. Haddaad warsato gaalada yaa abuuray cirka iyo dhulka waxay odhan Alle, waxaad dhahdaa bal ka warrama waxaad caabudaysaan Alle ka sokow hadduu ila doono Alle dhib miyey yihiin kuwa fayda dhibka ama hadduu ila doono naxariis ma joojin karaan naxariistiisa, waxaad dhahdaa waxaa i kaafiya

Alle ee korkiisa ha tala saarteen kuwa tala saaran.

39. Waxaad dhahdaa qoomkayoow sidaad tihiin u camalfala anna waan camal faliye waadna ogaan doontaan.

قُلْ يَٰقَوْمِ ٱعْمَلُوا۟ عَلَىٰ مَكَانَتِكُمْ إِنِّى عَٰمِلٌ ۖ فَسَوْفَ تَعْلَمُونَ ﴿٣٩﴾

40. Ruuxuu u yimaado cadaab dulleeya oo ku dago korkiisa cadaab joogta ah.

مَن يَأْتِيهِ عَذَابٌ يُخْزِيهِ وَيَحِلُّ عَلَيْهِ عَذَابٌ مُّقِيمٌ ﴿٤٠﴾

Allaha awoodda leh waa ku filan yahay addoommadiisa mana aha in dadka lagu cabsi galiyo waxa ka soo hadhay, hanuun iyo dhumidba waa awood Alle, wuxuu doono yuuna falaa cidduu doonana wuu ka aarsadaa, gaalana waa ogyihiin in cirka iyo dhulkaba Alle abuuray wax dhib ah iyo wax wanaag ahna cid aan Alle ahayn ma awoodo isagaana kaafiya dadka ee isaga uun ha la talo saarto, Nabiga iyo inta raacday waxay qaadi waddada xaqa ah ee toosan, gaalana waxay u leexatey meel xun cid walbana saas ha ahaato waxaa la ogaan doonaa cidduu haleelo cadaab joogta ah oo wax dulleeya. Muslim wuxuu wariyay: waxaa liibaaney ruux lagu hanuuniyey islaamka, noloshiisuna ahaatey cunno maalmeed kuna qancay wixii Alle siiyey. **[Az-Zumar: 36-40].**

41. Annagaa kugu soo dajinnay kitaabka (quraanka) dadka dartiis si dhab ah, ruuxii hanuunana wuxuu anfici naftiisa, kii dhumana wuxuu dhibi naftiisa, adiguna Nabiyow kama tihid wakiil.

إِنَّآ أَنزَلْنَا عَلَيْكَ ٱلْكِتَٰبَ لِلنَّاسِ بِٱلْحَقِّ ۖ فَمَنِ ٱهْتَدَىٰ فَلِنَفْسِهِۦ ۖ وَمَن ضَلَّ فَإِنَّمَا يَضِلُّ عَلَيْهَا ۖ وَمَآ أَنتَ عَلَيْهِم بِوَكِيلٍ ﴿٤١﴾

42. Alle ayaa oofsada nafta markay dhiman iyo tii aan dhimannin ee hurudday, wuxuuna hayn tuu geerida ku xukumay wuxuuna sii deyn tii kale tan iyo muddo magacaaban, arrintaasna aayaad (calaamooyin) yaa ugu sugan ciddii fikireysa.

ٱللَّهُ يَتَوَفَّى ٱلْأَنفُسَ حِينَ مَوْتِهَا وَٱلَّتِى لَمْ تَمُتْ فِى مَنَامِهَا ۖ فَيُمْسِكُ ٱلَّتِى قَضَىٰ عَلَيْهَا ٱلْمَوْتَ وَيُرْسِلُ ٱلْأُخْرَىٰٓ إِلَىٰٓ أَجَلٍ مُّسَمًّى ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَٰتٍ لِّقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ ﴿٤٢﴾

أَمِ ٱتَّخَذُوا۟ مِن دُونِ ٱللَّهِ شُفَعَآءَ ۚ قُلْ أَوَلَوْ كَانُوا۟ لَا يَمْلِكُونَ شَيْـًٔا وَلَا يَعْقِلُونَ ﴿٤٣﴾

43. Mise waxay ka yeesheen Alle wax ka soo hadhay shafeecayaal, waxaad dhahdaa (oo ma ka yeelanaysaan) xaataa haddayna wax hananayn waxna kasayn.

قُل لِّلَّهِ ٱلشَّفَٰعَةُ جَمِيعًا ۖ لَّهُۥ مُلْكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۖ ثُمَّ إِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿٤٤﴾

44. Waxaad dhahdaa Alle ayaa iska leh shafeeco oo dhan, waxaana u sugnaaday xukunka cirka iyo dhulka xaggiisaana leydiin celin.

وَإِذَا ذُكِرَ ٱللَّهُ وَحْدَهُ ٱشْمَأَزَّتْ قُلُوبُ ٱلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِٱلْـَٔاخِرَةِ ۖ وَإِذَا ذُكِرَ ٱلَّذِينَ مِن دُونِهِۦٓ إِذَا هُمْ يَسْتَبْشِرُونَ ﴿٤٥﴾

45. Marka la xuso Alle kaliya waxaa diidda qalbiyada kuwaan rumeynin aakhiro markii la xuso waxa Alle ka soo hadhayna markaasay bishaareystaan oo farxaan.

Quraanka Alle ayaa xaq ku soo dajiyey si loogu dhaqmo, xagga rumeynta ku dhaqanka, isku xukunka iyo raaciddiisa si dhab ah, Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) cidna kuma qasbo xaqa ee wuxuu u caddeeyay dhabta, ciddii markaas dhunta ama hanuunta waa isaga iyo dantiis, Nabiguna wakiil kama aha, awoodana Alle ayaa iska leh, nafta dadkana waa midka midna dili markuu doono midna fasixi sida marka la hurdo, waana arrin ciddii caqli leh ay ku waano qaadato, tan kale shafeecada Alle ayaa iska leh illeen isagaa xukuma cirka iyo dhulkaba, cid uusan fasixinna ma shafeecdo, ee waa in isaga la weydiistaa si dhab ahna loo caabudo mana aha in marka Alle kaliya la xuso la diido marka waxyaalo kale lala xusana la farxo sida gaaladii, xusid Alle ayaa mudan. **[Az-Zumar: 41-45].**

قُلِ ٱللَّهُمَّ فَاطِرَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ عَٰلِمَ ٱلْغَيْبِ وَٱلشَّهَٰدَةِ أَنتَ تَحْكُمُ بَيْنَ عِبَادِكَ فِى مَا كَانُوا۟ فِيهِ يَخْتَلِفُونَ ﴿٤٦﴾

46. Waxaad dhahdaa Nabiyow: Allow adaa abuuray cirka iyo dhulka ogna waxa maqan iyo waxa jooga, adaase kala bixin addoommadaada dhexdooda waxay isku khilaafsan yihiin.

وَلَوْ أَنَّ لِلَّذِينَ ظَلَمُوا۟ مَا فِى ٱلْأَرْضِ جَمِيعًا وَمِثْلَهُۥ مَعَهُۥ لَٱفْتَدَوْا۟ بِهِۦ

47. Hadday kuwii dulmiga falay waxa dhulka ku sugan dhammaantii iyo wax la mid

مِن سُوٓءِ ٱلۡعَذَابِ يَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِۚ وَبَدَا لَهُم مِّنَ ٱللَّهِ مَا لَمۡ يَكُونُواْ يَحۡتَسِبُونَ ﴿٤٧﴾

ah leeyihiin way iskaga furan lahaayeen cadaabka maalinta qiyaamaha, waxaana uga muuqday xagga Alle waxayn maleeysanaynin.

وَبَدَا لَهُمۡ سَيِّـَٔاتُ مَا كَسَبُواْ وَحَاقَ بِهِم مَّا كَانُواْ بِهِۦ يَسۡتَهۡزِءُونَ ﴿٤٨﴾

48. Waxaana u muuqday xumaantay kasbadeen, waxaana ku dhacay waxay ku jees jeesi jireen.

فَإِذَا مَسَّ ٱلۡإِنسَٰنَ ضُرّٞ دَعَانَا ثُمَّ إِذَا خَوَّلۡنَٰهُ نِعۡمَةٗ مِّنَّا قَالَ إِنَّمَآ أُوتِيتُهُۥ عَلَىٰ عِلۡمِۭۚ بَلۡ هِيَ فِتۡنَةٞ وَلَٰكِنَّ أَكۡثَرَهُمۡ لَا يَعۡلَمُونَ ﴿٤٩﴾

49. Markuu dhib taabto dadku wuu na baryayaa, markaanse siinno nicmo wuxuu dhahaa waxa la i siiyey waan mutaa, saa ma aha ee waannu imtixaami mase oga badankood.

قَدۡ قَالَهَا ٱلَّذِينَ مِن قَبۡلِهِمۡ فَمَآ أَغۡنَىٰ عَنۡهُم مَّا كَانُواْ يَكۡسِبُونَ ﴿٥٠﴾

50. Waxaa saas yidhi kuwii ka horreeyey waxna uma tarin waxay kasbadeen.

فَأَصَابَهُمۡ سَيِّـَٔاتُ مَا كَسَبُواْۚ وَٱلَّذِينَ ظَلَمُواْ مِنۡ هَٰٓؤُلَآءِ سَيُصِيبُهُمۡ سَيِّـَٔاتُ مَا كَسَبُواْ وَمَا هُم بِمُعۡجِزِينَ ﴿٥١﴾

51. Waxaana ku dhacay xumaantay kasbadeen, kuwii dulmi falay oo ka mid ahaa kuwaas waxaa ku dhici xumaantey kasbadeen, namana daaliyaan.

أَوَلَمۡ يَعۡلَمُوٓاْ أَنَّ ٱللَّهَ يَبۡسُطُ ٱلرِّزۡقَ لِمَن يَشَآءُ وَيَقۡدِرُۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَأٓيَٰتٖ لِّقَوۡمٖ يُؤۡمِنُونَ ﴿٥٢﴾

52. Miyeyna ogayn inuu Alle u waasiciyo rizqiga cidduu doono kuna cidhiidhyo (cidduu doono), arrintaasna waxaa ugu sugan aayad ciddii wax rumeyn.

Alle ayaa wax kasta aheysiiyey awooddana leh, kala bixin dadka qiyaamada, maalintaas oo gaaladu isku furan lahaayeen wax kasta haddii la siiyo, waxaana ku dhici waxayna maleysanayn iyadoo lagu abaalmarin kibirkoodii iyo jees jees koodii, mana habboona in marka dhib kugu dhacana aad Alle baridid, markuu khayr ku siiyana aad dhahdaa waan mutaa, sidii gaaladii hore oon waxba u tarin waxay kasbanayeen waxaana dhab ah in cid walba la abaal marin ama ha horreeyo ama ha dambeeyee, Alle ayaana nolasha waasiciya ama ku cidhiidhya

xigmad darteed, si ciddii xaqa rumeysay ugu waano qaadato, Qurdubi wuxuu yidhi: waxaa loo xusay kuwa xaqa rumeeyey waxay ogyihiin inuu waasicinta rizqiga ay tahay imtixaan lagana yaabo cidhiidhintiisu inay wayneyn tahay. **[Az-Zumar: 46-52].**

* قُلْ يَٰعِبَادِيَ ٱلَّذِينَ أَسْرَفُوا۟ عَلَىٰٓ أَنفُسِهِمْ لَا تَقْنَطُوا۟ مِن رَّحْمَةِ ٱللَّهِ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ يَغْفِرُ ٱلذُّنُوبَ جَمِيعًا ۚ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلْغَفُورُ ٱلرَّحِيمُ ﴿٥٣﴾

53. Waxaad dhahdaa Nabiyow addoommadayda ku xad gudbay naftoodow ha ka quusannina naxariista Alle, Alle ayaa dhaafa danbiyada dhammaantoode, waana dambi dhaafbadane naxariis badane.

وَأَنِيبُوٓا۟ إِلَىٰ رَبِّكُمْ وَأَسْلِمُوا۟ لَهُۥ مِن قَبْلِ أَن يَأْتِيَكُمُ ٱلْعَذَابُ ثُمَّ لَا تُنصَرُونَ ﴿٥٤﴾

54. U noqda Allihiin una hoggaansama ka hor cadaab idiin yimaaddoon laydiinkana gargaarayn.

وَٱتَّبِعُوٓا۟ أَحْسَنَ مَآ أُنزِلَ إِلَيْكُم مِّن رَّبِّكُم مِّن قَبْلِ أَن يَأْتِيَكُمُ ٱلْعَذَابُ بَغْتَةً وَأَنتُمْ لَا تَشْعُرُونَ ﴿٥٥﴾

55. Raaca kan wanaagsan ee laydiinka soo dajiyey Alle xaggiisa, ka hor cadaab idinku yimaadda kado, idinkoon ogayn.

أَن تَقُولَ نَفْسٌ يَٰحَسْرَتَىٰ عَلَىٰ مَا فَرَّطتُ فِى جَنۢبِ ٱللَّهِ وَإِن كُنتُ لَمِنَ ٱلسَّٰخِرِينَ ﴿٥٦﴾

56. Ama odhan nafu shalleytee waxaan ku gaboodfallay cibaadada Alle waxaana ahaa kuwa jees jeesa.

أَوْ تَقُولَ لَوْ أَنَّ ٱللَّهَ هَدَىٰنِى لَكُنتُ مِنَ ٱلْمُتَّقِينَ ﴿٥٧﴾

57. Ama ayan odhan haddii Alle i hanuuniyo waxaan noqon lahaa kuwa dhawrsada.

أَوْ تَقُولَ حِينَ تَرَى ٱلْعَذَابَ لَوْ أَنَّ لِى كَرَّةً فَأَكُونَ مِنَ ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿٥٨﴾

58. Ama ayan odhan markay aragto cadaabka hadday noqosho ii sugnaan laheyd waxaan ahaan lahaa kuwa samo fala.

بَلَىٰ قَدْ جَآءَتْكَ ءَايَٰتِى فَكَذَّبْتَ بِهَا وَٱسْتَكْبَرْتَ وَكُنتَ مِنَ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٥٩﴾

59. Saas ma ah ee waxaa kuu yimid aayaadkaygii waadna beenisay waadna iswaynaysay waxaadna ka mid noqotay gaalada.

Dadku way gafayaan had iyo jeer Alle na wuxuu ugu bishaareeyay addoommadiisa mu'miniinta ah inayna ka quusan naxariistiisa waa dambi dhaafee, loona noqdo Alle, loona hoggaansamo geeri iyo qiyaame ka hor. Taasoon calaacal iyo catow iyo i celiya aan wax tarayn, maxaa yeelay xaqu waa cad yahay ciddii isla waynaata oo xaqa diiddana waxay ka mid noqon gaalada xaq diidayaasha ah, aayadahanna waa yeedhid iyo digniinta dadka oo dhan, Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: ruuxii ka quusiya addoomaha Alle toobadda tan ka dib wuxuu diiday kitaabka Alle. **[Az-Zumar: 53-59].**

وَيَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ تَرَى ٱلَّذِينَ كَذَبُوا۟ عَلَى ٱللَّهِ وُجُوهُهُم مُّسْوَدَّةٌ ۚ أَلَيْسَ فِى جَهَنَّمَ مَثْوًى لِّلْمُتَكَبِّرِينَ ﴿٦٠﴾

60. Maalinta qiyaamana waxaad arkeysaa kuwii ku been abuurtay Alle korkiisa oo wajiyadoodu madow yahay, miyayna jahannamo dhexdeedu ahayn hoyga kuwa is kibriya.

وَيُنَجِّى ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ ٱتَّقَوْا۟ بِمَفَازَتِهِمْ لَا يَمَسُّهُمُ ٱلسُّوٓءُ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿٦١﴾

61. Wuuna koriyaa Alle kuwa dhawrsaday liibaantooda darteed, mana taabto xumaanu mana murugoodaan.

ٱللَّهُ خَٰلِقُ كُلِّ شَىْءٍ ۖ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ وَكِيلٌ ﴿٦٢﴾

62. Alle na waa abuuraha wax kaste, waana wax walba wakiilkiisa, «maamulaha».

لَّهُۥ مَقَالِيدُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۗ وَٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ أُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْخَٰسِرُونَ ﴿٦٣﴾

63. Isagaana iska leh xukunka samooyinka iyo dhulkaba, kuwa ka gaaloobay aayaadka Alle na waa kuwa khasaaray.

قُلْ أَفَغَيْرَ ٱللَّهِ تَأْمُرُوٓنِّىٓ أَعْبُدُ أَيُّهَا ٱلْجَٰهِلُونَ ﴿٦٤﴾

64. Waxaad dhahdaa ma wax ka soo hadhay Alle ayaad i faraysaan inaan caabudo jaahiliin yahay.

وَلَقَدْ أُوحِىَ إِلَيْكَ وَإِلَى ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِكَ لَئِنْ أَشْرَكْتَ لَيَحْبَطَنَّ عَمَلُكَ وَلَتَكُونَنَّ مِنَ ٱلْخَٰسِرِينَ ﴿٦٥﴾

65. Waxaa dhab ahaan loogu waxyooday adiga iyo kuwii kaa horreeyeyba Nabiyow haddaad wax la wadaajiso (Alle) waxaa buri camalkaaga, waxaadna ka mid noqon kuwa khasaaray.

بَلِ ٱللَّهَ فَٱعۡبُدۡ وَكُن مِّنَ ٱلشَّٰكِرِينَ ﴿٦٦﴾

66. Ee Alle uun caabud noqona kuwa ku mahdiya.

وَمَا قَدَرُواْ ٱللَّهَ حَقَّ قَدۡرِهِۦ وَٱلۡأَرۡضُ جَمِيعٗا قَبۡضَتُهُۥ يَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِ وَٱلسَّمَٰوَٰتُ مَطۡوِيَّٰتُۢ بِيَمِينِهِۦۚ سُبۡحَٰنَهُۥ وَتَعَٰلَىٰ عَمَّا يُشۡرِكُونَ ﴿٦٧﴾

67. Mayna waynaynin gaaladii Alle waynaantiisa dhabta ah, isagoo dhulka dhammaantiis ku jiro qabashada gacantiisa maalinta qiyaame, samooyinkuna ku duuban yihiin midigtiisa, Alle ayaa ka nasahan kana sarreeya waxay la wadaajiyeen.

Qiyaamadu waa dhab, cid walbana waxaa laga abaalmarin camalkeeda, waxaana loo qaybsami mid farxa oo bishaaraysta iyo mid naxa oo dullooba, Alle ayaana xukunka iyo awoodda iska leh maalintaas, mana habboona in lala wadaajiyo cibaadadiisa cid kale, ciddii wax la wadaajisana camalkeedu wuu buri, xumaanna ka sarreeya iyo wax lala wadaajiyaba. Ibnu Cabaas wuxuu yidhi: gaaladu ma waynayn Alle mudnaantiisa, ruuxii rumeeya in Alle wax walba karo wuu wayneeyay waynidiisa dhabta ah, ruuxaan rumeyninna ma waynayn. **[Az-Zumar: 60-67].**

وَنُفِخَ فِي ٱلصُّورِ فَصَعِقَ مَن فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَن فِي ٱلۡأَرۡضِ إِلَّا مَن شَآءَ ٱللَّهُۖ ثُمَّ نُفِخَ فِيهِ أُخۡرَىٰ فَإِذَا هُمۡ قِيَامٞ يَنظُرُونَ ﴿٦٨﴾

68. Waxaa la afuufi suurka (buunka qiyaame) waxaana suuxi (dhiman) waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan, cidduu Alle doona mooyee, markaasaa la afuufi mid kale waxaana soo bixi dadkii iyagoo taagan oo sugi (xukunka Alle).

وَأَشۡرَقَتِ ٱلۡأَرۡضُ بِنُورِ رَبِّهَا وَوُضِعَ ٱلۡكِتَٰبُ وَجِاْيٓءَ بِٱلنَّبِيِّـۧنَ وَٱلشُّهَدَآءِ وَقُضِيَ بَيۡنَهُم بِٱلۡحَقِّ وَهُمۡ لَا يُظۡلَمُونَ ﴿٦٩﴾

69. Wuxuuna la ifi dhulku nuurka Allehiis waxaana la soo dajin (dhawayn) kitaabkii (camalka) waxaana la keeni Nabiyadii iyo maraggii (malaa'igta), waxaana lagu kala xukumi dhexdooda xaq lamana dulmiyo.

70. Waxaana loo oofin (dhammeyn) naf kastaa waxay camal fashay, Alle na waa ogyahay waxay camal falayaan.

وَوُفِّيَتْ كُلُّ نَفْسٍ مَّا عَمِلَتْ وَهُوَ أَعْلَمُ بِمَا يَفْعَلُونَ ﴿٧٠﴾

71. Waxaana loo kaxeyn kuwii gaaloobay xagga jahannamo iyagoo kooxo ah markay yimaadaan naartana waxaa la furaa albaabbadeeda waxayna u dhahaan malaa'igtii cadaabka ee naarta haysay miyeyna idiin imaannin rasuullo idinka mid ah oo idinku akhriya aayaadka Allihiin idiinkana diga la kulanka maalintiinnan, waxayna dhihi way noo yimaadeen waxaase ku rumoobay gaalada kalimaddii cadaabka (ee Alle).

وَسِيقَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓاْ إِلَىٰ جَهَنَّمَ زُمَرًا ۖ حَتَّىٰٓ إِذَا جَآءُوهَا فُتِحَتْ أَبْوَٰبُهَا وَقَالَ لَهُمْ خَزَنَتُهَآ أَلَمْ يَأْتِكُمْ رُسُلٌ مِّنكُمْ يَتْلُونَ عَلَيْكُمْ ءَايَٰتِ رَبِّكُمْ وَيُنذِرُونَكُمْ لِقَآءَ يَوْمِكُمْ هَٰذَا ۚ قَالُواْ بَلَىٰ وَلَٰكِنْ حَقَّتْ كَلِمَةُ ٱلْعَذَابِ عَلَى ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٧١﴾

72. Waxaana lagu dhihi gala albaabada jahannamo idinkoo ku waari dhexdeeda iyadaana u xun meelay ku hoydaan kuwa is kibriya.

قِيلَ ٱدْخُلُوٓاْ أَبْوَٰبَ جَهَنَّمَ خَٰلِدِينَ فِيهَا ۖ فَبِئْسَ مَثْوَى ٱلْمُتَكَبِّرِينَ ﴿٧٢﴾

Sidoo kale qiyaamadu waa xaq sugan waxaana dadka ku dhici qaylo ay cid kasta la suuxi lana dhiman intuu Alle doono mooyee, ka dibna la afuufi suurka qiyaame, dadkuna soo bixi Allehoodna hor istaagi, dhulkuna la ifi nuurka Alle, lana keeni kitaabkii camalka, Nabiyadii iyo markhaatiyadii, caddaaladna Alle ku kala xugmin isagoon cidna dulmiyeyn, naf walbana waxaa lagu abaal marin waxay camal fashay isagoo Alle dhab u ogyahay, gaaladana waxaa loo kaxayn xagga naarta jahannamo iyagoo kooxa ah, malaa'igtuna ay warsan in rasuullo loo soo diray ku akhrida xaqa ugana digta qiyaamada, way qiran gaaladii arrintaas waxaase u waajibtay ciqaab daran, waxaana la fari inay galaan jahannamo oo markaas la furay albaabadeeda wayna ku waari, waana hoyga kuwa iskibriya.

Abuu Hureeyre waxaa laga wariyey in Nabigu yidhi: labada afuufo waxaa u dhaxeyn afartan, Abuu Hureyre wuxuu yidhi: ma ogi afartankaas. **[Az-Zumar: 68-72].**

73. Waxaana loo wadi kuwii ka dhawrsaday Rabbigood xagga jannada iyagoo kooxa ah markay yimaadaan jannadana iyadoo la furay albaabadeeda (mar hore) waxay ku dhihi malaa'igta jannadaa heysa: nabadgalyo korkiinna ha ahaato, waad wanaagsanaateen (liibaanteen) ee gala jannada idinkoo ku waari.

وَسِيقَ ٱلَّذِينَ ٱتَّقَوْا۟ رَبَّهُمْ إِلَى ٱلْجَنَّةِ زُمَرًا ۖ حَتَّىٰٓ إِذَا جَآءُوهَا وَفُتِحَتْ أَبْوَٰبُهَا وَقَالَ لَهُمْ خَزَنَتُهَا سَلَٰمٌ عَلَيْكُمْ طِبْتُمْ فَٱدْخُلُوهَا خَٰلِدِينَ ﴿٧٣﴾

74. Waxayna dhihi mahad waxaa iska leh Allaha noo rumeeyey yaboohiisa, nana dhaxal siiyay dhulka (jannada) waxaanna ka dagnaa jannada meeshaan doonno waxaana wanaag badan ajriga kuwii camal falay.

وَقَالُوا۟ ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ ٱلَّذِى صَدَقَنَا وَعْدَهُۥ وَأَوْرَثَنَا ٱلْأَرْضَ نَتَبَوَّأُ مِنَ ٱلْجَنَّةِ حَيْثُ نَشَآءُ ۖ فَنِعْمَ أَجْرُ ٱلْعَٰمِلِينَ ﴿٧٤﴾

75. Waxaad arkaysaa malaa'igtoo ku wareegsan gaararka carshiga kuna tasbiixsan mahadda Rabbigood, waana la kala xukumi dadkii dhexdooda si xaq ah, waxaana la dhihi mahad Alle ayaa iska leh ee ah Rabbiga caalamka.

وَتَرَى ٱلْمَلَٰٓئِكَةَ حَآفِّينَ مِنْ حَوْلِ ٱلْعَرْشِ يُسَبِّحُونَ بِحَمْدِ رَبِّهِمْ ۚ وَقُضِىَ بَيْنَهُم بِٱلْحَقِّ ۚ وَقِيلَ ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ رَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٧٥﴾

Mu'miniinta waxaa loo wadi xagga jannada iyagoo wafdi ah, iyadoo loo sii furi malaa'igtuna soo dhaweyn oo salaami kuna dhihi waad liibaanteene jannada gala idinkoo ku waari, waxayna ku mahdiyaan Allahooda, illeen wuxuu galiyey janno ay ka dagi meeshay rabaane, malaa'igtuna waxay ku meeraysan gaararka carshiga, xaalkuna wuxuu ku dhammaan in dadka caddaalad lagu kala xukumo iyo in awood iyo mahadi u sugnaatay Rabbiga caalamka. Maxaa ka wayn maalintaas, maxaase ka farax iyo liibaan badan mu'miniinta kana khasaare iyo qoomammo badan gaalada, kana awood iyo caddaalad badan Allaha xakamka caadilka ah.

Mucaad waxaa laga wariyey in Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) yidhi: furaha jannadu waa: Alle mooyee ilaah kale oo xaq lagu caabudo ma jiro (ashahaadada). Waxaa weriyey Imaam Axmed. **[Az-Zumar: 73-75].**

Suurat Ghaafir

سُورَةُ غَافِرٍ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. (Waxay ku tusin mucjisada quraanka sidii soo hor martay).

حمٓ ﴿١﴾

2. Soo dajinta kitaabka (quraanka) waxay ka ahaatay Allaha adkaada ee wax walba og.

تَنزِيلُ ٱلْكِتَٰبِ مِنَ ٱللَّهِ ٱلْعَزِيزِ ٱلْعَلِيمِ ﴿٢﴾

3. Ee dhaafa danbiga aqbalana toobadda, ayna daran tahay ciqaabtiisu, ee u saaxiiba hodannimo iyo waasicnimo, ku xaq lagu caabudo oo aan Ilaahay ahaynna ma jiro, xaggiisaana loo noqon.

غَافِرِ ٱلذَّنۢبِ وَقَابِلِ ٱلتَّوْبِ شَدِيدِ ٱلْعِقَابِ ذِى ٱلطَّوْلِ ۖ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ۖ إِلَيْهِ ٱلْمَصِيرُ ﴿٣﴾

4. Kuma doodo aayaadka Alle kuwa gaaloobey mooyee, ee yuuna ku dhagrin (kedin) gagadoonkooda adduunku.

مَا يُجَٰدِلُ فِىٓ ءَايَٰتِ ٱللَّهِ إِلَّا ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ فَلَا يَغْرُرْكَ تَقَلُّبُهُمْ فِى ٱلْبِلَٰدِ ﴿٤﴾

5. Waxaa beeniyay hortood qoomkii (Nabi) Nuux iyo xisbiyadii ka dambeeyey, waxayna doontay ummad kastaa rasuulkoodii inay qabato (oy dilaan) waxayna ku doodeen baadil (xumaan) inay xaqa ku tirtiraan, markaasaan qabtay ee waa sidee ciqaabteydii.

كَذَّبَتْ قَبْلَهُمْ قَوْمُ نُوحٍ وَٱلْأَحْزَابُ مِنۢ بَعْدِهِمْ ۖ وَهَمَّتْ كُلُّ أُمَّةٍۭ بِرَسُولِهِمْ لِيَأْخُذُوهُ ۖ وَجَٰدَلُوا۟ بِٱلْبَٰطِلِ لِيُدْحِضُوا۟ بِهِ ٱلْحَقَّ فَأَخَذْتُهُمْ ۖ فَكَيْفَ كَانَ عِقَابِ ﴿٥﴾

6. Saasayna ugu sugnaatay kalimaddii Alle kuwii gaaloobay, waana inay yihiin naarta ehelkeeda.

وَكَذَٰلِكَ حَقَّتْ كَلِمَتُ رَبِّكَ عَلَى ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓاْ أَنَّهُمْ أَصْحَٰبُ ٱلنَّارِ ﴿٦﴾

Quraanka Alle ayaa soo dajiyey, waana adkaade, wax walba oge, dambi dhaafe, toobad aqbale, ciqaab darane, iyo khayr badane, xaggiisa loo noqon, quraanka oo la beeniyana oo si xun loogu doodo waa caadada gaalada, adduunka oo lagu hormarana kuma tusiso jeclaansho Alle, ee ha ku kadsoomin socsocodka gaalada (xaqdiidayaasha), gaalana waa isku fikrad laga soo billaabo waqtigi Nabi Nuux, waxayna dooni inay dilaan Nabiyada iyo dadka wanaagga fari, xaqana xumaan ku qariyaan, waxaase daran ciqaabta Alle uu ku abaal marin naar ruuxii xaqa ku qariya xumaan, Alle iyo Rasuulkiisuna waa ka bari. **[Ghaafir: 1-6].**

7. Kuwa (malaa'igta) xambaarsan carshiga iyo kuwa gaararkiisa ah waxay ku tasbiixsan kuna mahadin Alle hood wayna rumeysan yihiin, waxayna u dambi dhaaf warsan kuwa rumeeyey iyagoo dhihi Raabigeenow waxaad ugu waasac noqotay wax kasta naxariis iyo ogaanshee u dambi dhaaf kuwa toobadkeena ee raaca jidkaaga kana dhawr cadaabka jaxiimo.

ٱلَّذِينَ يَحْمِلُونَ ٱلْعَرْشَ وَمَنْ حَوْلَهُۥ يُسَبِّحُونَ بِحَمْدِ رَبِّهِمْ وَيُؤْمِنُونَ بِهِۦ وَيَسْتَغْفِرُونَ لِلَّذِينَ ءَامَنُواْ ۖ رَبَّنَا وَسِعْتَ كُلَّ شَىْءٍ رَّحْمَةً وَعِلْمًا فَٱغْفِرْ لِلَّذِينَ تَابُواْ وَٱتَّبَعُواْ سَبِيلَكَ وَقِهِمْ عَذَابَ ٱلْجَحِيمِ ﴿٧﴾

8. Allow gali kuwaas jannada cadni ee ah taad u yaboohday iyaga iyo ruuxii suubbanaada oo ah aabayaalkood, haweenkooda iyo carruurtooda, adigaa ah adkaade falsane.

رَبَّنَا وَأَدْخِلْهُمْ جَنَّٰتِ عَدْنٍ ٱلَّتِى وَعَدتَّهُمْ وَمَن صَلَحَ مِنْ ءَابَآئِهِمْ وَأَزْوَٰجِهِمْ وَذُرِّيَّٰتِهِمْ ۚ إِنَّكَ أَنتَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿٨﴾

9. Kana dhawr xumaanta (ciqaabta), ruuxaad ka dhawrto xumaanta maalintaas waad u naxariisatay taasina waa liibaanta wayn.

وَقِهِمُ ٱلسَّيِّـَٔاتِ ۚ وَمَن تَقِ ٱلسَّيِّـَٔاتِ يَوْمَئِذٍ فَقَدْ رَحِمْتَهُۥ ۚ وَذَٰلِكَ هُوَ ٱلْفَوْزُ ٱلْعَظِيمُ ﴿٩﴾

Iimaanku waa wax wayn oo qiimo badan; maxaa yeelay malaa'igta Alle ee xambaarsan carshiga iyo kuwa gaarar jooga waxay u ducayn una dambidhaaf warsan mu'mininta jidka Alle ku toosan iyo ehelkooda, iyagoo u warsan Alle inuu janno galiyo ciqaabna ka dhawro, taasna waxay ku tusin qaraabonnimada ugu fiican inay tahay tan iimaanka ee isku xidhay cirka iyo dhulka, wuxuuna ka sarreeyaa wax kastoo wax isku xidha, saasaana looga baahan yahay mu'mininta inay isu jeclaadaan isuguna duceeyaan. Waxaana sugnaatay hadduu muslim u duceeyo walaalkiisa muslimka ah isagoo ka maqan malaa'igtu waxay dhahdaa: aamiin, adna waxaa kuu sugnaatay wax la mid ah. Waxaa wariyey Muslim. **[Ghaafir: 7-9].**

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ يُنَادَوۡنَ لَمَقۡتُ ٱللَّهِ أَكۡبَرُ مِن مَّقۡتِكُمۡ أَنفُسَكُمۡ إِذۡ تُدۡعَوۡنَ إِلَى ٱلۡإِيمَٰنِ فَتَكۡفُرُونَ ﴿١٠﴾

10. Kuwa gaaloobay waxaa loogu dhawaaqaa (qiyaamada) cadhada Alle ayaa ka wayn cadhadaad naftiinna u cadhootaan, maxaa yeelay waxaa laydiinku yeedhi jiray iimaanka markaasaad gaaloobayseen.

قَالُواْ رَبَّنَآ أَمَتَّنَا ٱثۡنَتَيۡنِ وَأَحۡيَيۡتَنَا ٱثۡنَتَيۡنِ فَٱعۡتَرَفۡنَا بِذُنُوبِنَا فَهَلۡ إِلَىٰ خُرُوجٖ مِّن سَبِيلٖ ﴿١١﴾

11. Waxay dhihi Allow waxaad na dishay laba jeer waxaadna na noolaysay laba jeer waana qirannay dambigannagii ee ma suuroowdaa jid naarta looga baxo.

ذَٰلِكُم بِأَنَّهُۥٓ إِذَا دُعِيَ ٱللَّهُ وَحۡدَهُۥ كَفَرۡتُمۡ وَإِن يُشۡرَكۡ بِهِۦ تُؤۡمِنُواْۚ فَٱلۡحُكۡمُ لِلَّهِ ٱلۡعَلِيِّ ٱلۡكَبِيرِ ﴿١٢﴾

12. Arrintaas waxaa ugu wacan in marka loo yeedho Alle kaliya aad gaaloowdaan, haddii wax lala wadaajiyana aad rumeysaan xukunka dhammaantiisna Alle ayaa iska leh ee sarreeya waynna.

هُوَ ٱلَّذِي يُرِيكُمۡ ءَايَٰتِهِۦ وَيُنَزِّلُ لَكُم مِّنَ ٱلسَّمَآءِ رِزۡقٗاۚ وَمَا يَتَذَكَّرُ إِلَّا مَن يُنِيبُ ﴿١٣﴾

13. Alle waa kan idin tusiya aayaadkiisa idiinkana soo dajiya samada rizqi (roob), mana xusuusto ruux Alle u noqon mooyee.

فَٱدۡعُواْ ٱللَّهَ مُخۡلِصِينَ لَهُ ٱلدِّينَ وَلَوۡ كَرِهَ ٱلۡكَٰفِرُونَ ﴿١٤﴾

14. Ee bari (caabud) Alle adoo u kali yeeli cibaadada haba naceen gaaladuye.

Cadhada Alle iyo ciqaabtiisa yaa ka wayn kana culus u cadhoonsho naf markay meel xun kuu horseeddo xaqana kaa leexiso, calaacal iyo catoowna wax ma taro qiyaamada iyo dambi la qirto midna, mar haddaad adduunkii ku dhunto.

Mana habboona xaqna ma aha in marka Alle kaliya la xuso la gaaloobo xaqana la diido, marka wax kale lala caabudana la rumeeyo, arrintaas xukunkeedana Allaha wayn baa maamuli, ee ah kan tusiya dadka aayadahiisa, cirkana roob uga keena, xaqna ay tahay in loo toobad keeno lana caabudo isagoo loo kali yeeli diinta iyo cibaadada, haba naceen oo diideen gaaladuye.

Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) wuxuu yidhi: barya Alle sarreeye idinkoo yaqiinsan ijaabo, ogaadana in Alle sarreeye uusan ajiibayn duco qalbi halmaansan oo shuqloon, waxaa wariyay tirmidi iyo ibnu abii xaatim. **[Ghaafir: 10-14].**

رَفِيعُ ٱلدَّرَجَٰتِ ذُو ٱلۡعَرۡشِ يُلۡقِي ٱلرُّوحَ مِنۡ أَمۡرِهِۦ عَلَىٰ مَن يَشَآءُ مِنۡ عِبَادِهِۦ لِيُنذِرَ يَوۡمَ ٱلتَّلَاقِ ﴿١٥﴾

15. Alle waa kan ay sarrayso darajadiisu (waxna kor yeela) carshigana iska leh, kuna soo dajiya waxyigiisa oo ka mid ah amarkiisa cidduu doono isagoo addoommadiisa ka mid ah, si uu uga digo maalinta kulanka (qiyaamada).

يَوۡمَ هُم بَٰرِزُونَۖ لَا يَخۡفَىٰ عَلَى ٱللَّهِ مِنۡهُمۡ شَيۡءٞۚ لِّمَنِ ٱلۡمُلۡكُ ٱلۡيَوۡمَۖ لِلَّهِ ٱلۡوَٰحِدِ ٱلۡقَهَّارِ ﴿١٦﴾

16. Maalintay u soo muuqan (u soo bixi) Alle waxba kama qarsoona korkiisa, wuxuuna dhihi Alle yaa xukunka iska leh maanta, markaasuu dhihi: Allaha kalida ah ee awoodda badan.

ٱلۡيَوۡمَ تُجۡزَىٰ كُلُّ نَفۡسِۭ بِمَا كَسَبَتۡۚ لَا ظُلۡمَ ٱلۡيَوۡمَۚ إِنَّ ٱللَّهَ سَرِيعُ ٱلۡحِسَابِ ﴿١٧﴾

17. Maanta (qiyaamada) waxaa laga abaalmarin naf kastaa waxay kasbatay, dulmina ma jiro maanta, Alle na wey dag dag badan tahay xisaabtiisu.

وَأَنذِرۡهُمۡ يَوۡمَ ٱلۡأٓزِفَةِ إِذِ ٱلۡقُلُوبُ لَدَى ٱلۡحَنَاجِرِ كَٰظِمِينَۚ مَا لِلظَّٰلِمِينَ مِنۡ حَمِيمٖ وَلَا شَفِيعٖ يُطَاعُ ﴿١٨﴾

18. Uga dig Nabiyow dadka maalinta dhaw (qiyaamada) markuu wadnuhu imaan dhuunta (cabsi darteed) iyagoo naxsan daalimiinna uma sugnaan sokeeye iyo mid u shafeecoo la maqlo.

19. Alle waa ogyahay khayaanada indhaha iyo waxay qarin laabtu.

يَعْلَمُ خَآئِنَةَ ٱلْأَعْيُنِ وَمَا تُخْفِى ٱلصُّدُورُ ﴿١٩﴾

20. Alle wuxuu xukumaa xaqa, waxay caabudina oo Alle ka sokeeya waxba ma xukumaan, Alle na waa maqle arka ah.

وَٱللَّهُ يَقْضِى بِٱلْحَقِّ ۖ وَٱلَّذِينَ يَدْعُونَ مِن دُونِهِۦ لَا يَقْضُونَ بِشَىْءٍ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْبَصِيرُ ﴿٢٠﴾

Allaa sharaf leh, cidduu doonana sharrifa, waxyigiisana ku soo dajiyay addoommaduu doortay ee Nabiyada ahaa, si ay dadka ugu digaan. Xukunka adduunka iyo aakhiraba Alle ayaa iska leh wax ka qarsoonna ma jiro cidna ma dulmiyo, xisaabtiisuna waa daran tahay, dadkana waxaa looga digayaa maalinta qiyaame ee dhaw, illeen wixii imaanba waa dhawyahaye, waana maalin cabsi badan wadnuhuna dhuunta imaan, cidna wax isu tarayn, Alle na wax walba daalacan, xaqana xukumi, waxa la caabudo ee ka soo hadhayna ayan waxba qabaneyn.

Xadiith alqudsi waxaa ku sugnaaday in Alle yidhi: addoommadaydoow waan ka reebay dulmiga naftayda waxaana ka yeelay dhexdiinna mid reebban ee hays dulmiyina... Waxaa wariyay Muslim. **[Ghaafir: 15-20].**

21. Miyayna ku soconnin dhulka ooyan fiirinnin siday noqotay cidhibtii kuwi ka horreeyey (gaaladan), waxay ahaayeen kuwa ka xoog badan kana camiraad badan dhulka, markaasuu qabtay Alle danbigooda dartiis umana sugnaan waxa Alle ka soo hadhay wax daafaca.

* أَوَلَمْ يَسِيرُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ فَيَنظُرُوا۟ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلَّذِينَ كَانُوا۟ مِن قَبْلِهِمْ ۚ كَانُوا۟ هُمْ أَشَدَّ مِنْهُمْ قُوَّةً وَءَاثَارًا فِى ٱلْأَرْضِ فَأَخَذَهُمُ ٱللَّهُ بِذُنُوبِهِمْ وَمَا كَانَ لَهُم مِّنَ ٱللَّهِ مِن وَاقٍ ﴿٢١﴾

22. Waxaana saas ugu wacan inay ahayd inay ula imaan jirtay rasuulladoodii xujooyin, oy ka gaaloobeen markaas Alle qabtay maxaa yeelay waa xoog badane ay daran tahay ciqaabtiisu.

ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ كَانَت تَّأْتِيهِمْ رُسُلُهُم بِٱلْبَيِّنَٰتِ فَكَفَرُوا۟ فَأَخَذَهُمُ ٱللَّهُ ۚ إِنَّهُۥ قَوِىٌّ شَدِيدُ ٱلْعِقَابِ ﴿٢٢﴾

23. Dhab ahaan yaan (Nabi) Muuse ugu dirray isagoo wata aayaadkannaga iyo xujo cad.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا مُوسَىٰ بِـَٔايَٰتِنَا وَسُلْطَٰنٍ مُّبِينٍ ﴿٢٣﴾

24. Xagga fircoon, haamaan iyo qaaruun waxayna dheheen waa sixirroow beenaala ah.

إِلَىٰ فِرْعَوْنَ وَهَٰمَٰنَ وَقَٰرُونَ فَقَالُوا۟ سَٰحِرٌ كَذَّابٌ ﴿٢٤﴾

25. Markuu ugala yimid xaqa agtannada waxay dheheen dila wiilasha kuwa rumeeyey, daayana haweenka (gabdhaha), dhagarta gaaladuna ma aha waxaan khasaare ahayn.

فَلَمَّا جَآءَهُم بِٱلْحَقِّ مِنْ عِندِنَا قَالُوا۟ ٱقْتُلُوٓا۟ أَبْنَآءَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ مَعَهُۥ وَٱسْتَحْيُوا۟ نِسَآءَهُمْ ۚ وَمَا كَيْدُ ٱلْكَٰفِرِينَ إِلَّا فِى ضَلَٰلٍ ﴿٢٥﴾

26. Wuxuu yidhi fircoon: i daaya aan dilo Muusee hana u yeedho Rabbigiis, waxaan ka cabsan inuu idinka baddalo diinta ama uu ka muujiyo dhulka fasaad.

وَقَالَ فِرْعَوْنُ ذَرُونِىٓ أَقْتُلْ مُوسَىٰ وَلْيَدْعُ رَبَّهُۥٓ ۖ إِنِّىٓ أَخَافُ أَن يُبَدِّلَ دِينَكُمْ أَوْ أَن يُظْهِرَ فِى ٱلْأَرْضِ ٱلْفَسَادَ ﴿٢٦﴾

27. Wuxuuna yidhi (Nabi) Muuse: waxaan ka magan galay Rabbigay iyo Rabbigiin mid kasta oo is kibriya (isla wayn) oon rumayn maalinta xisaabta qiyaamada.

وَقَالَ مُوسَىٰٓ إِنِّى عُذْتُ بِرَبِّى وَرَبِّكُم مِّن كُلِّ مُتَكَبِّرٍ لَّا يُؤْمِنُ بِيَوْمِ ٱلْحِسَابِ ﴿٢٧﴾

Dhulka waa in lagu waano qaato lana eego dadkii horee dagganaa iyo sida Alle u halaagay iyagoo xoog badnaa, markey beeniyeen rasuulladoodii Alle na si daran ayuu u ciqaabay, tan kale qisada Nabi Muuse wax badan yey quraanka ku soo aroortay, halkanna Fircoon, Haamaan iyo Qaaruun waxay beeniyeen xaqii, waxayna is fareen in la laayo wiilasha kuwa rumeeyey Muuse, haweenkana daayaan, waxay dhagraan gaalana waa uun khasaare, tan kale Fircoon wuxuu codsaday in la daayo si uu u dilo Muuse isaga oo sheegi inuu badali diinta, dhulkana fasaadin, taasina waa caadada xumaan iyo shar ka taliyayaasha inay wanaagga iyo dadkiisa ceebeeyaan, lana dagaallamaan. Nabi Muusana wuxuu ka magan galay Alle kibir badane dhammaantiis oo beeniyey xisaabinta «qiyaame». **[Ghaafir: 21-27].**

28. Wuxuu yidhi nin mu'min ah oo ka mid ah dadka fircoon oo qarinaayay iimaankiisa, ma waxaad u dilaysaan in uu yidhi Rabbigay waa Alle, isagoo idiin kala yimid xujooyin xagga Allihiin hadduu beenaale yahayna isagay dhibi beentiisu, hadduu runle yahayna waxaa idin ku dhici wuxuu idiin ku yaboohay qaarkiis, Alle na ma hanuuniyo danbi badane been badan.

وَقَالَ رَجُلٌ مُّؤْمِنٌ مِّنْ ءَالِ فِرْعَوْنَ يَكْتُمُ إِيمَٰنَهُۥٓ أَتَقْتُلُونَ رَجُلًا أَن يَقُولَ رَبِّىَ ٱللَّهُ وَقَدْ جَآءَكُم بِٱلْبَيِّنَٰتِ مِن رَّبِّكُمْ ۖ وَإِن يَكُ كَٰذِبًا فَعَلَيْهِ كَذِبُهُۥ ۖ وَإِن يَكُ صَادِقًا يُصِبْكُم بَعْضُ ٱلَّذِى يَعِدُكُمْ ۖ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَهْدِى مَنْ هُوَ مُسْرِفٌ كَذَّابٌ ﴿٢٨﴾

29. Qoomkayoow idinkaa iska leh xukunka maanta una adag dhulka, yaase nooga gargaari cadaabka Alle hadduu inoo yimaado, fircoon wuxuu yidhi: idin kula talin maayo waxaan ahayn ra'yigayga (waxa ii muuqda) idinkumana hanuuniyo waxaan ahayn waddada xaqa ah.

يَٰقَوْمِ لَكُمُ ٱلْمُلْكُ ٱلْيَوْمَ ظَٰهِرِينَ فِى ٱلْأَرْضِ فَمَن يَنصُرُنَا مِنۢ بَأْسِ ٱللَّهِ إِن جَآءَنَا ۚ قَالَ فِرْعَوْنُ مَآ أُرِيكُمْ إِلَّا مَآ أَرَىٰ وَمَآ أَهْدِيكُمْ إِلَّا سَبِيلَ ٱلرَّشَادِ ﴿٢٩﴾

30. Wuxuu yidhi kii rumeeyey (xaqa): qoomkayoow waxaan idiin ka cabsan sidii maalintii xisbiyadii.

وَقَالَ ٱلَّذِىٓ ءَامَنَ يَٰقَوْمِ إِنِّىٓ أَخَافُ عَلَيْكُم مِّثْلَ يَوْمِ ٱلْأَحْزَابِ ﴿٣٠﴾

31. Sidii qoomkii Nabi Nuux iyo ree caad iyo thamuud iyo kuwii ka dambeeyey, Alle na ma aha mid la doona dulmi addoommada.

مِثْلَ دَأْبِ قَوْمِ نُوحٍ وَعَادٍ وَثَمُودَ وَٱلَّذِينَ مِنۢ بَعْدِهِمْ ۚ وَمَا ٱللَّهُ يُرِيدُ ظُلْمًا لِّلْعِبَادِ ﴿٣١﴾

32. Qoomkayow waxaan idkinka cabsan maalinta isu yeedhidda (qiyaamada).

وَيَٰقَوْمِ إِنِّىٓ أَخَافُ عَلَيْكُمْ يَوْمَ ٱلتَّنَادِ ﴿٣٢﴾

33. Maalintaad jeedsan doontaan idinkoo carari, idiinna sugnayn wax Alle idinka ilaaliya, ruux Alle dhumiyeyna malaha «ma jiro» wax hanuunin.

يَوْمَ تُوَلُّونَ مُدْبِرِينَ مَا لَكُم مِّنَ ٱللَّهِ مِنْ عَاصِمٍ ۗ وَمَن يُضْلِلِ ٱللَّهُ فَمَا لَهُۥ مِنْ هَادٍ ﴿٣٣﴾

Cid fiican oo xumaanta reebta wanaaggana farta lama waayo, waxaana ka mid ah mu'minkaas Fircoon ehelkiisa ka mid ahaa, ee qariyay iimaankiisa kuna yidhi: ma waxaad dileysaan nin yidhi Rabbigay waa Alle, oo xujooyin idiin la yimid, hadduu beenaale yahay isagay dhibi, hadduu runle yahayna waxaa idinku dhici wuxuu sheegi qaarkiis, maantana idinkaa dhulka xukuma oo ka muuqda, haddiise dhib Alle yimaaddo yaa inaga korin, Fircoonse nin xun buu ahaa wuxuuna ku yidhi qoomkiisii: arrini waa taan anigu sheego oon ra'yiyeeyo waxaan wanaag ahaynna idin tusin maayo, laakiin ma dhabbaa? Xumaantuu tusiyay una hoggaamiyay miyaan loo halaagin sidii kuwii ka horreeyey, taasna waxay ka digi xumaan wade warkiisa. **[Ghaafir: 28-33].**

34. Waxaa dhab ahaan idiin kula yimid xujooyin mar hore (Nabi) Yuusuf, kamana aydaan tagin shaki inaad kaga sugan tihiin wuxuu idiin la yimid, markuu dhintayna waxaad dhahdeen ma soo bixinaayo Alle gadaashiis rasuul, saasuuna u dhumiyaa Alle ruux xad gudba oo shaki badan.

وَلَقَدْ جَآءَكُمْ يُوسُفُ مِن قَبْلُ بِٱلْبَيِّنَٰتِ فَمَا زِلْتُمْ فِى شَكٍّ مِّمَّا جَآءَكُم بِهِۦ ۖ حَتَّىٰٓ إِذَا هَلَكَ قُلْتُمْ لَن يَبْعَثَ ٱللَّهُ مِنۢ بَعْدِهِۦ رَسُولًا ۚ كَذَٰلِكَ يُضِلُّ ٱللَّهُ مَنْ هُوَ مُسْرِفٌ مُّرْتَابٌ ﴿٣٤﴾

35. Kuwa ku doodaya aayaadkannaga xujo u timid la'aanteed waxaa ku waynaatay cadho Alle agtiisa iyo kuwa rumeeyay, saasuuna u daabacaa Alle qalbi kastoo is kibriya oo daalim ah.

ٱلَّذِينَ يُجَٰدِلُونَ فِىٓ ءَايَٰتِ ٱللَّهِ بِغَيْرِ سُلْطَٰنٍ أَتَىٰهُمْ ۖ كَبُرَ مَقْتًا عِندَ ٱللَّهِ وَعِندَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ۚ كَذَٰلِكَ يَطْبَعُ ٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ قَلْبِ مُتَكَبِّرٍ جَبَّارٍ ﴿٣٥﴾

36. Wuxuu yidhi Fircoon haamaanoow ii dhis daar (sare) si aan ugu gaadho waddooyinka.

وَقَالَ فِرْعَوْنُ يَٰهَٰمَٰنُ ٱبْنِ لِى صَرْحًا لَّعَلِّىٓ أَبْلُغُ ٱلْأَسْبَٰبَ ﴿٣٦﴾

أَسۡبَٰبَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ فَأَطَّلِعَ إِلَىٰٓ إِلَٰهِ
مُوسَىٰ وَإِنِّي لَأَظُنُّهُۥ كَٰذِبًا ۚ وَكَذَٰلِكَ
زُيِّنَ لِفِرۡعَوۡنَ سُوٓءُ عَمَلِهِۦ وَصُدَّ
عَنِ ٱلسَّبِيلِ ۚ وَمَا كَيۡدُ فِرۡعَوۡنَ إِلَّا فِي
تَبَابٖ ﴿٣٧﴾

37. Waddooyinka samooyinka markaas aan daalacdo ilaaha Muuse anigu waxaan u malayn beenaalee, saasaana loogu qurxiyay Fircoon camalkiisa xun loogana leexiyay jidka, dhagarta Fircoonna ma aha waxaan khasaare ahayn.

وَقَالَ ٱلَّذِيٓ ءَامَنَ يَٰقَوۡمِ ٱتَّبِعُونِ أَهۡدِكُمۡ
سَبِيلَ ٱلرَّشَادِ ﴿٣٨﴾

38. Wuxuu yidhi kii rumeeyay (xaqa): qoomkayoow i raaca waxaan idinku hanuunin jidka fiicane.

يَٰقَوۡمِ إِنَّمَا هَٰذِهِ ٱلۡحَيَوٰةُ ٱلدُّنۡيَا مَتَٰعٞ
وَإِنَّ ٱلۡأٓخِرَةَ هِيَ دَارُ ٱلۡقَرَارِ ﴿٣٩﴾

39. Qoomkayoow nolashan adduunyo ee dhaw waa uun raaxo (yar) aakharaase guri nagaadi ah.

مَنۡ عَمِلَ سَيِّئَةٗ فَلَا يُجۡزَىٰٓ إِلَّا مِثۡلَهَا ۖ
وَمَنۡ عَمِلَ صَٰلِحٗا مِّن ذَكَرٍ أَوۡ أُنثَىٰ
وَهُوَ مُؤۡمِنٞ فَأُوْلَٰٓئِكَ يَدۡخُلُونَ ٱلۡجَنَّةَ
يُرۡزَقُونَ فِيهَا بِغَيۡرِ حِسَابٖ ﴿٤٠﴾

40. Ruuxii camal xun sameeya laguma abaalmariyo wax la mid ah mooyee, ruuxiise camal fiican fala lab iyo dhaddigba isagoo rumaysan kuwaasi waxay gali jannada, waana lagu arzuqi dhexdeeda xisaab la'aan.

Qisada Nabi Yuusuf waxay ku faahfaahsan tahay suuradda magaciisa xambaarsan, tan kale in gadaashiis Nabi la soo diri ciddii diidday waa cid dhunsan, isla wayne, dulmibadane, xaqdiide iyo xumaan ku murme, dhammaantood Alle waa u cadhoodaa iyo mu'miniintuba, xaqana ma arko kaasoo kale, waxaa iyana wax lala yaabo ah doqonnimadii Fircoon iyo isla waynidiisii intuu ka doonay in loo dhiso guri dheer oo uu dadka ku tusiyo inuu Ilaahay daydayi. Taasina waa waallidiisii iyo camalkiisii xumaa ee wax badan quraanku ka warramay. Ma siman yihiin kaas iyo kan jidka fiican dadka ku toosiyay, ugana digay xumaanta adduunyo, iyadoo cid walba la abaalmarin rag iyo haweenba. **[Ghaafir: 34-40].**

* وَيَٰقَوۡمِ مَا لِيٓ أَدۡعُوكُمۡ إِلَى ٱلنَّجَوٰةِ
وَتَدۡعُونَنِيٓ إِلَى ٱلنَّارِ ﴿٤١﴾

41. Qoomkayoow maxaa ugu wacan inaan idiinku yeedho korid iyo badbaado idinna iigu yeedhaan naar.

تَدْعُونَنِي لِأَكْفُرَ بِٱللَّهِ وَأُشْرِكَ بِهِۦ مَا لَيْسَ لِي بِهِۦ عِلْمٌ وَأَنَا۠ أَدْعُوكُمْ إِلَى ٱلْعَزِيزِ ٱلْغَفَّٰرِ ﴿٤٢﴾

42. Iiguna yeedhaan inaan ka gaaloobo Alle lana wadaajiyo (cibaadada) waxaanan oqoon u lahayn, aniguna waxaan idiin ku yeedhi xagga Allaha adkaada ee dambidhaafa.

لَا جَرَمَ أَنَّمَا تَدْعُونَنِيٓ إِلَيْهِ لَيْسَ لَهُۥ دَعْوَةٌ فِى ٱلدُّنْيَا وَلَا فِى ٱلْءَاخِرَةِ وَأَنَّ مَرَدَّنَآ إِلَى ٱللَّهِ وَأَنَّ ٱلْمُسْرِفِينَ هُمْ أَصْحَٰبُ ٱلنَّارِ ﴿٤٣﴾

43. Waxaan shaki lahayn in waxaad iigu yeedhaysaan xaggiisa uusan lahayn nacfi (iyo wax ajiiba ducada kuwa baryi) adduun iyo aakhiraba, waxaana laynoo celin xagga Alle kuwa xadgudbana iyaga uunbaa ah asaxaabta (ehelka) naarta.

فَسَتَذْكُرُونَ مَآ أَقُولُ لَكُمْ ۚ وَأُفَوِّضُ أَمْرِىٓ إِلَى ٱللَّهِ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ بَصِيرٌۢ بِٱلْعِبَادِ ﴿٤٤﴾

44. Waadna xusuusan doontaan waxaan idin ku leeyahay, waxaana u bandhigay amarkayga xagga Alle, illeen Alle ayaa arka addoommadee.

فَوَقَىٰهُ ٱللَّهُ سَيِّـَٔاتِ مَا مَكَرُوا۟ وَحَاقَ بِـَٔالِ فِرْعَوْنَ سُوٓءُ ٱلْعَذَابِ ﴿٤٥﴾

45. Markaasaa Alle ka dhawray mu'minkaas xumaantay ku dhagreen, waxaana ku dhacay (ku dagay) Fircoon iyo ehelkiisii cadaab xun.

ٱلنَّارُ يُعْرَضُونَ عَلَيْهَا غُدُوًّا وَعَشِيًّا ۚ وَيَوْمَ تَقُومُ ٱلسَّاعَةُ أَدْخِلُوٓا۟ ءَالَ فِرْعَوْنَ أَشَدَّ ٱلْعَذَابِ ﴿٤٦﴾

46. Naar baana loo bandhigaa aroortii iyo galabtiiba, maalintay kacayso saacadduna (qiyaamada waxaa ladhihi): galiya Fircoon iyo ehelkiisa kan ugu daran cadaab.

Ninkaasu wuxuu u jeediyey qoomkiisii hadallo iyo waano qiimo badan, wuxuuna u sheegay inuu wanaag iyo nabadgalyo ugu yeedhi iyana naar iyo gaalnimo aan wax khayr iyo nacfi ah lahayn iyo caabudid ilaahyo baas, wuxuuna caddeeyey in xadgudbayaal abaalkoodu yahay naar, ayna xusuusan

doonaan waxa wanaagsan ee uu sheegi amarkiisana uu Alle u bandhigi isagoo arka addoommadiisa, Alle na waa ka nabadgaliyey dhagartii Fircoon isagana waxaa ku dagay xumaantay maleegeen, qabriga iyo qiyaamadana waa lagu cadaabi iyaga iyo wixii waddadooda qaada. **[Ghaafir: 41-46].**

وَإِذْ يَتَحَآجُّونَ فِى ٱلنَّارِ فَيَقُولُ ٱلضُّعَفَٰٓؤُا۟ لِلَّذِينَ ٱسْتَكْبَرُوٓا۟ إِنَّا كُنَّا لَكُمْ تَبَعًا فَهَلْ أَنتُم مُّغْنُونَ عَنَّا نَصِيبًا مِّنَ ٱلنَّارِ ﴿٤٧﴾

47. Xusuuso waqtigay ku doodi ehelu naarku naarta dhexdeeda ooy ku odhan kuwii (raaciyada ahaa) kuwii (madaxda ahaa) ee isla weynaa idinkaan idin raacaynay ee wax manooga taraysaan qayb naarta ka mid ah.

قَالَ ٱلَّذِينَ ٱسْتَكْبَرُوٓا۟ إِنَّا كُلٌّ فِيهَآ إِنَّ ٱللَّهَ قَدْ حَكَمَ بَيْنَ ٱلْعِبَادِ ﴿٤٨﴾

48. Waxay dheheen kuwii iskibriyey dhammaanteen waxaan ku sugan nahay naarta dhexdeeda, Alle na waa kala xukumay addoommadiisa dhexdooda.

وَقَالَ ٱلَّذِينَ فِى ٱلنَّارِ لِخَزَنَةِ جَهَنَّمَ ٱدْعُوا۟ رَبَّكُمْ يُخَفِّفْ عَنَّا يَوْمًا مِّنَ ٱلْعَذَابِ ﴿٤٩﴾

49. Waxayna ku dhaheen kuwa naarta ku sugan adeegaha jahannamo noo barya Allihiin inuu naga fududeeyo maalin cadaabka.

قَالُوٓا۟ أَوَلَمْ تَكُ تَأْتِيكُمْ رُسُلُكُم بِٱلْبَيِّنَٰتِ ۖ قَالُوا۟ بَلَىٰ ۚ قَالُوا۟ فَٱدْعُوا۟ ۗ وَمَا دُعَٰٓؤُا۟ ٱلْكَٰفِرِينَ إِلَّا فِى ضَلَٰلٍ ﴿٥٠﴾

50. Waxay dheheen adeegayaashii miyeyna ahayn inay idiinla timid rasuulladii xujooyin, waxay dhaheen way noola timid, waxayna dhaheen barya idinku marka Alle, baryada gaaladana ma aha waxaan baadi iyo khasaare ahayn.

إِنَّا لَنَنصُرُ رُسُلَنَا وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ فِى ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا وَيَوْمَ يَقُومُ ٱلْأَشْهَٰدُ ﴿٥١﴾

51. Annagaa u gargaari rasuulladannada iyo kuwa rumeeyey xaqa nolosha adduun iyo maalinta ay kici maragyadu.

52. Maalintayna anfacayn daalimiinta cudur daarkoodu, ayna u sugnaan naclad iyo guri xun (naar).

يَوْمَ لَا يَنفَعُ ٱلظَّٰلِمِينَ مَعْذِرَتُهُمْ ۖ وَلَهُمُ ٱللَّعْنَةُ وَلَهُمْ سُوٓءُ ٱلدَّارِ ﴿٥٢﴾

Dood iyo muran iyo calaacal ehelunaarna wax ma taro, waxayna sheegi aayaddani inay murmi madaxdii xumayd iyo shacabkii xumaanta ku raacay, dhammaanna ay naarta gali, wax uga maciini cadaabkana ayna heleyn. Alle na u gargaari rasulladiisa iyo kuwa xaqa ku raacay. Saas darteed waa in wanaagga laysku raacaa iyo Alle u dhawaanshaha, oonse laysku raacin layskuna taageerin gaalnimada iyo xumaanta, si aan qiyaamada loo dulloobin. **[Ghaafir: 47-52].**

53. Dhab ahaan yaan u siinnay Nabi Muuse hanuun (Nabinnimo) una dhaxalsiinnay bani israa'iil kitaabka (tawreed).

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا مُوسَى ٱلْهُدَىٰ وَأَوْرَثْنَا بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ٱلْكِتَٰبَ ﴿٥٣﴾

54. Hanuun iyo waano isagoo u ah kuwa caqliga leh.

هُدًى وَذِكْرَىٰ لِأُو۟لِى ٱلْأَلْبَٰبِ ﴿٥٤﴾

55. Ee samir Nabiyow yabooha Alle waa dhabe, dambi dhaafna waydiiso kuna tasbiixso adoo ku dheehan mahadda Allehaa galab iyo aroorba.

فَٱصْبِرْ إِنَّ وَعْدَ ٱللَّهِ حَقٌّ وَٱسْتَغْفِرْ لِذَنۢبِكَ وَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ بِٱلْعَشِىِّ وَٱلْإِبْكَٰرِ ﴿٥٥﴾

56. Kuwa ku murmi aayaadka Alle xujo la'aan u timid laabtooda ma aha waxaan kibir ayna gaadhayn ahayn, ee ka magan gala Alle isagaa wax maqla waxna arkee.

إِنَّ ٱلَّذِينَ يُجَٰدِلُونَ فِىٓ ءَايَٰتِ ٱللَّهِ بِغَيْرِ سُلْطَٰنٍ أَتَىٰهُمْ إِن فِى صُدُورِهِمْ إِلَّا كِبْرٌ مَّا هُم بِبَٰلِغِيهِ ۚ فَٱسْتَعِذْ بِٱللَّهِ ۖ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْبَصِيرُ ﴿٥٦﴾

57. Abuuridda cirka iyo dhulka yaa ka wayn abuuridda dadka (sida u muuqata) laakiin dadka badidiis ma oga.

لَخَلْقُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ أَكْبَرُ مِنْ خَلْقِ ٱلنَّاسِ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٥٧﴾

58. Ma eka indhoole iyo arke iyo kuwa rumeeyey (xaqa) camal fiicanna falay iyo

وَمَا يَسْتَوِى ٱلْأَعْمَىٰ وَٱلْبَصِيرُ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ

xumaanloow, wax yar baadse xusuusanaysaan.

وَلَا ٱلْمُسِيٓـَٔ ۚ قَلِيلًا مَّا تَتَذَكَّرُونَ ﴿٥٨﴾

59. Saacadda (qiyaame) way iman shaki la'aan laakiin dadka badidiis ma rumeynayaan.

إِنَّ ٱلسَّاعَةَ لَءَاتِيَةٌ لَّا رَيْبَ فِيهَا وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٥٩﴾

Wax badan yaa qisada Nabi Muuse iyo Nabiyada kalaba lagu soo celceliyey quraanka, si Nabigu u weheshado una xusuusto sidii loo dhibay Alle na ugu gargaaray, waxaana Alle u dardaarmay Nabiga inuu sii badiyo cibaadada Alle iyo ku xidhnaantiisa, kuwa ku murmi xaqa xuja la'aan waxaa qalbigooda galay isla weyni aan meel jirin, Allahase abuuray cirka iyo dhulka miyaa ka caajisi soo celintooda iyo wuxuu rabo inuu abuuro, ma sinna ruux hanuunsan iyo mid dhunsan, mana sinna mu'min camal falay iyo xumaanloow, mase xusuusan yihiin dadku saacadda qiyaame, waa dhab inaan mu'min baarri ah iyo gaal xun sinnayn laakiin dadku saas ma garanayaan. **[Ghaafir: 53-59].**

60. Wuxuu yidhi Rabbigiin i barya aan idin ajiibee (aqbalee), kuwa iska weyneeya cibaadadayda waxay gali doonaan naarta jahannamo, iyagoo dulleysn.

وَقَالَ رَبُّكُمُ ٱدْعُونِىٓ أَسْتَجِبْ لَكُمْ ۚ إِنَّ ٱلَّذِينَ يَسْتَكْبِرُونَ عَنْ عِبَادَتِى سَيَدْخُلُونَ جَهَنَّمَ دَاخِرِينَ ﴿٦٠﴾

61. Alle waa kan idiin yeeley habeenka inaad xasilloonaataan dhexdiisa, maalintana (ifid) dadku dhexdiisa wax ku arkaan, Alle na waa kan wax ku galladaysta dadka, laakiin dadka badankiisu kuma mahdiyaan.

ٱللَّهُ ٱلَّذِى جَعَلَ لَكُمُ ٱلَّيْلَ لِتَسْكُنُوا۟ فِيهِ وَٱلنَّهَارَ مُبْصِرًا ۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَذُو فَضْلٍ عَلَى ٱلنَّاسِ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يَشْكُرُونَ ﴿٦١﴾

62. Kaasi waa Allihiin, Rabbina idiin ah, wax walbana abuuro, Alle mooyee mid kale ma jiro oo xaq lagu caabudo ee xaggee xaqa laydiinka iili.

ذَٰلِكُمُ ٱللَّهُ رَبُّكُمْ خَٰلِقُ كُلِّ شَىْءٍ لَّآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ۖ فَأَنَّىٰ تُؤْفَكُونَ ﴿٦٢﴾

63. Saas oo kale yaa loo iilay kuwii aayaadka Alle diidi jiray.

كَذَٰلِكَ يُؤْفَكُ ٱلَّذِينَ كَانُوا۟ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ يَجْحَدُونَ ﴿٦٣﴾

64. Alle waa kan idiinka yeelay dhulka meel sugnaansho, cirkana dhismo oo idin sawiray wanaajiyayna suuraddiinna oo idinku arzaaqay wax wanaagsan, kaasi waa Allihiin, waxaana sarreeya oo nasahan Allaha caalamka Rabbigiisa ah.

ٱللَّهُ ٱلَّذِى جَعَلَ لَكُمُ ٱلْأَرْضَ قَرَارًا وَٱلسَّمَآءَ بِنَآءً وَصَوَّرَكُمْ فَأَحْسَنَ صُوَرَكُمْ وَرَزَقَكُم مِّنَ ٱلطَّيِّبَٰتِ ۚ ذَٰلِكُمُ ٱللَّهُ رَبُّكُمْ ۖ فَتَبَارَكَ ٱللَّهُ رَبُّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٦٤﴾

65. Alle waa ka nool, Alle aan isaga ahaynna ma jiro oo xaq lagu caabudo, ee barya (caabudana) idinkoo u kali yeeli diinta, mahadna waxaa iska leh Rabbiga caalamka.

هُوَ ٱلْحَىُّ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ فَٱدْعُوهُ مُخْلِصِينَ لَهُ ٱلدِّينَ ۗ ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ رَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٦٥﴾

Nabigu wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee): baryadu waa cibaado, wuxuuna akhriyey aayaddan. Saas darteed waa in uun Alle la baryaa lana caabudaa, ciddii iska kibrisana waxay gali iyadoo dulleysan naarta, maxaa yeeley waa kan noogu nicmeeyey habeenka iyo maalintaba, wax walbana abuuray dhulkana inooga yeeley wax lagu sugnaado cirkana dhismo, oo ina sawiray qurxiyayna suuraddeenna, wax wanaagsan oo xalaal ahna inagu arzaaqay, kaasi waa Alleheen wuxuuna inaga mudan yahay mahad, baryo, cibaado iyo wayneyn. **[Ghaafir: 60-65].**

66. Waxaad dhahdaa Nabiyow waxaa layga reebay inaan caabudo waxaad baryeysaan Alle ka sokow markay iiga yimaadeen xujooyin xagga Rabbigay, waxaana lay faray inaan u hoggaansamo Rabbiga caalamka.

* قُلْ إِنِّى نُهِيتُ أَنْ أَعْبُدَ ٱلَّذِينَ تَدْعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ لَمَّا جَآءَنِىَ ٱلْبَيِّنَٰتُ مِن رَّبِّى وَأُمِرْتُ أَنْ أُسْلِمَ لِرَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٦٦﴾

67. Alle waa kan idinka abuuray carrada, haddana dhibic, haddana calaqo markaas idin soo bixiyey idinkoo ilma ah, haddana aad gaadhaan xooggiinna, haddana aad noqotaan odayo,

هُوَ ٱلَّذِى خَلَقَكُم مِّن تُرَابٍ ثُمَّ مِن نُّطْفَةٍ ثُمَّ مِنْ عَلَقَةٍ ثُمَّ يُخْرِجُكُمْ طِفْلًا ثُمَّ لِتَبْلُغُوٓا۟ أَشُدَّكُمْ ثُمَّ لِتَكُونُوا۟ شُيُوخًا ۚ وَمِنكُم مَّن يُتَوَفَّىٰ مِن قَبْلُ ۖ

waxaase idinka mid ah cid la oofsado (dhimata) intaas ka hor, iyo inaad gaadhaan waqti magacaaban waxaad u dhaw dihiin inaad wax kastaan.

وَلِتَبْلُغُوٓاْ أَجَلًا مُّسَمًّى وَلَعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ ﴿٦٧﴾

68. Alle waa kan nooleeya waxna dila, markuu doono inuu xukumo amarna wuxuu uun dhahaa ahaw wuuna ahaadaa.

هُوَ ٱلَّذِى يُحْىِۦ وَيُمِيتُ ۖ فَإِذَا قَضَىٰٓ أَمْرًا فَإِنَّمَا يَقُولُ لَهُۥ كُن فَيَكُونُ ﴿٦٨﴾

69. Ma waadan la yaabeyn kuwa ku murmi aayaadka Alle xagee looga iili xaqa.

أَلَمْ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ يُجَٰدِلُونَ فِىٓ ءَايَٰتِ ٱللَّهِ أَنَّىٰ يُصْرَفُونَ ﴿٦٩﴾

70. Kuwa beeniyay kitaabka «quraanka» iyo waxaan la soo dirray rasuulladannada way ogaan doonaan, cidhibtooda.

ٱلَّذِينَ كَذَّبُواْ بِٱلْكِتَٰبِ وَبِمَآ أَرْسَلْنَا بِهِۦ رُسُلَنَا ۖ فَسَوْفَ يَعْلَمُونَ ﴿٧٠﴾

71. Marka qoolal la yeelo luquntooda iyo silsilado, iyadoo lagu jiidayo.

إِذِ ٱلْأَغْلَٰلُ فِىٓ أَعْنَاقِهِمْ وَٱلسَّلَٰسِلُ يُسْحَبُونَ ﴿٧١﴾

72. Biyo aad u kulul dhexdood, haddana «naar» ayaa lagu huriyaa.

فِى ٱلْحَمِيمِ ثُمَّ فِى ٱلنَّارِ يُسْجَرُونَ ﴿٧٢﴾

73. Markaas lagu dhaho aaway waxaad la wadaajiseen cibaadada.

ثُمَّ قِيلَ لَهُمْ أَيْنَ مَا كُنتُمْ تُشْرِكُونَ ﴿٧٣﴾

74. Alle ka sokoow, waxayna odhan waa naga dhumeen (waynay), mase aannaan ahayn kuwo wax u caabuday horay, saasuuna Alle u dhumiyaa gaalada.

مِن دُونِ ٱللَّهِ ۖ قَالُواْ ضَلُّواْ عَنَّا بَل لَّمْ نَكُن نَّدْعُواْ مِن قَبْلُ شَيْـًٔا ۚ كَذَٰلِكَ يُضِلُّ ٱللَّهُ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٧٤﴾

75. Taasina waa waxaad ugu farxi jirteen xumaanta dhulka dhexdiisa xaq darro iyo waxaad la kibri jirteen.

ذَٰلِكُم بِمَا كُنتُمْ تَفْرَحُونَ فِى ٱلْأَرْضِ بِغَيْرِ ٱلْحَقِّ وَبِمَا كُنتُمْ تَمْرَحُونَ ﴿٧٥﴾

76. Ee gala irdaha jahannamo idinkoo ku waari, waxaana u xun meeluu ku hoydo isla wayne naarta jahannamo.

ٱدۡخُلُوٓاْ أَبۡوَٰبَ جَهَنَّمَ خَٰلِدِينَ فِيهَاۖ فَبِئۡسَ مَثۡوَى ٱلۡمُتَكَبِّرِينَ ٧٦

Alle wuxuu dadka ku adkeeyay inay isaga uun caabudaan, una hoggaansamaan Nabiguna waa ka fog yahay inuu u jeedsado waxaan Alle ahayn ee waa guubaabo dadka. Awooddana Alle ayaa iska leh, dadkana abuuray dilina doona, ciddii xaq darro ku muranta oo kibirta oo caabudda Alle ka sokow wax kale ama xumaan ku addecda wuxuu gali naarta isagoo dullaysan oo xidhxidhan. **[Ghaafir: 66-76].**

77. Samir (adkayso) Nabiyow yabooha Alle waa xaqe, haddaannu ku tusinno waxa (guusha) aannu kuu yaboohi qaarked (intaad nooshahay waa wanaag), amaan ku oofsanno (intaas ka hor) xaggannagaa loo soo celin (gaaladaas).

فَٱصۡبِرۡ إِنَّ وَعۡدَ ٱللَّهِ حَقٌّۚ فَإِمَّا نُرِيَنَّكَ بَعۡضَ ٱلَّذِي نَعِدُهُمۡ أَوۡ نَتَوَفَّيَنَّكَ فَإِلَيۡنَا يُرۡجَعُونَ ٧٧

78. Waxaan dirray rasuullo adiga hortaa waxaa ka mid ah kuwo aan kaaga qisoonnay iyo kuwo aannaan kaaga qisoonin, rasuulna aayad (mucjisad) ah idiin lama imaan karo idanka Alle la'aantiis, hadduuse yimaado amarka Alle (cadaabkiisu) waxaa la xukumi xaq waxaana ku khasaaray halkaas kuwa xumaanlowga ah.

وَلَقَدۡ أَرۡسَلۡنَا رُسُلٗا مِّن قَبۡلِكَ مِنۡهُم مَّن قَصَصۡنَا عَلَيۡكَ وَمِنۡهُم مَّن لَّمۡ نَقۡصُصۡ عَلَيۡكَۗ وَمَا كَانَ لِرَسُولٍ أَن يَأۡتِيَ بِـَٔايَةٍ إِلَّا بِإِذۡنِ ٱللَّهِۚ فَإِذَا جَآءَ أَمۡرُ ٱللَّهِ قُضِيَ بِٱلۡحَقِّ وَخَسِرَ هُنَالِكَ ٱلۡمُبۡطِلُونَ ٧٨

79. Alle waa kan idiin yeelay nicmoolayda (xoolaha) inaad waxna ka fuushaan waxna ka cuntaan.

ٱللَّهُ ٱلَّذِي جَعَلَ لَكُمُ ٱلۡأَنۡعَٰمَ لِتَرۡكَبُواْ مِنۡهَا وَمِنۡهَا تَأۡكُلُونَ ٧٩

وَلَكُمْ فِيهَا مَنَٰفِعُ وَلِتَبْلُغُوا۟ عَلَيْهَا حَاجَةً فِى صُدُورِكُمْ وَعَلَيْهَا وَعَلَى ٱلْفُلْكِ تُحْمَلُونَ ﴿٨٠﴾

80. Waxaana idinka sugnaaday dhexdeeda nacfi iyo inaad ku gaadhaan danihiinna laabta idinkaga jira, korkeeda iyo doonta ayaana la idinku xambaaraa.

وَيُرِيكُمْ ءَايَٰتِهِۦ فَأَىَّ ءَايَٰتِ ٱللَّهِ تُنكِرُونَ ﴿٨١﴾

81. Wuxuuna idin tusiyaa aayaadkiisa ee teed aayaadka Alle diidaysaan.

Samirka iyo adkaysigu wax badan baa quraanka lagu sheegay, Alle na wuxuu Nabiga u yaboohay inuu abaal marin gaaladii xaqa diidday, ama adduun iyo nolosha Nabiga ama aakhiro. Tan kale wuxuu Alle inoo sheegay in rasuulladii uu diray qaarna ka qisooday kuwo kalana uu ka aamusay, wax mucjisad la imaan kara idan Alle la'aantiina ma jiro, markase amarka Alle yimaado dad waa la kala xaaqi xumaanlowna halkaasuu ku khasaaray, Alle na waa kan inoogu nicmeeyey xoolaha, doonyaha iyo gaadiidka kale ee la raaco, si danaha loo gaadho, wuxuuna ina tusiyaa aayadihiisa mana habboona in la diido aayaadkaas. Saas darteed waa in Alle nicmadiisa la aqoonsado laguna mahadiyo wanaaggana loogu kaalmaysto. **[Ghaaflr: 77-81].**

أَفَلَمْ يَسِيرُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ فَيَنظُرُوا۟ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ ۚ كَانُوٓا۟ أَكْثَرَ مِنْهُمْ وَأَشَدَّ قُوَّةً وَءَاثَارًا فِى ٱلْأَرْضِ فَمَآ أَغْنَىٰ عَنْهُم مَّا كَانُوا۟ يَكْسِبُونَ ﴿٨٢﴾

82. Miyayna ku soconnin dhulka oo ay fiiriyaan siday noqotay cidhibtii kuwii ka horreeyay, waxay ahaayeen kuwo ka badan kana xoog badan kana camirid badan dhulka (saameyn iyo shaqo), waxna uma tarin waxay kasbadeen.

فَلَمَّا جَآءَتْهُمْ رُسُلُهُم بِٱلْبَيِّنَٰتِ فَرِحُوا۟ بِمَا عِندَهُم مِّنَ ٱلْعِلْمِ وَحَاقَ بِهِم مَّا كَانُوا۟ بِهِۦ يَسْتَهْزِءُونَ ﴿٨٣﴾

83. Markay ula yimaadeen rasuulladoodii xujooyin waxay ku farxeen gaaladi waxa agtooda ah oo cilmi (diinta khilaafsan) ah, waxaana ku dagay waxay ku jeesjeesi jireen (abaalkiisii).

فَلَمَّا رَأَوْا۟ بَأْسَنَا قَالُوٓا۟ ءَامَنَّا بِٱللَّهِ وَحْدَهُۥ وَكَفَرْنَا بِمَا كُنَّا بِهِۦ مُشْرِكِينَ ﴿٨٤﴾

84. Markay arkaan cadaabkannaga waxay dhahaan waxaan rumaynay Alle kaliya waana

diidnay waxaan Alle la wadaajin jirray.

85. Mana aha kuu anfici iimaankoodu markay arkaan cadaabkannaga, waa sunnada (dariiqada) Alle ee u horraysay addoommadiisa, waxaana ku khasaaray halkaas gaalada.

فَلَمْ يَكُ يَنفَعُهُمْ إِيمَٰنُهُمْ لَمَّا رَأَوْا۟ بَأْسَنَا ۖ سُنَّتَ ٱللَّهِ ٱلَّتِى قَدْ خَلَتْ فِى عِبَادِهِۦ ۖ وَخَسِرَ هُنَالِكَ ٱلْكَٰفِرُونَ ﴿٨٥﴾

Aayadahan waxay ka warrami in ay habboon tahay in dhulka la maro laguna waano qaato sida Alle ku falay kuwii xoogga badnaa ee dhulka cammiray ee horreeyey, waxna uusan u tarin waxay kasbadeen, markay rasuulladii u yimaadeen iyagoo mucjisad watana ay diideen kuna farxeen waxay haystaan oo cilmi diinta khilaafsan ah, ciqaabna markaas ku dhacday. Markayse gaaladu iyo xumaanlawgu arkaan dhabta yay qaylyaan diidaanna waxay caabudi jireen ama ku dhaqmi jireen, markaasoo kalase rumayni wax ma tarto, waana jidka Alle ee horreeyay, waxaana halkaas qiyaamada ku khasaari gaalo, xadiithna waxaa ku sugnaaday in (Alle aqbalo tawbadda addoonka intaan sakaraadku u imaan). Khasaaraha dhabta ahna waa kan qiyaame. **[Ghaafir: 82-85].**

Suurat Fussilat

سُورَةُ فُصِّلَتْ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxay ku tusin mucjisada quraanka sida soo hormartay.

حمٓ ﴿١﴾

2. Quraanka waa soo dajinta Alle naxariista guud iyo mid gaaraba naxariista.

تَنزِيلٌ مِّنَ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ ﴿٢﴾

3. Waana kitaab loo caddeeyey aayadahiisa isagoo quraan carabi ku qoran ah ciddii wax garan.

كِتَٰبٌ فُصِّلَتْ ءَايَٰتُهُۥ قُرْءَانًا عَرَبِيًّا لِّقَوْمٍ يَعْلَمُونَ ﴿٣﴾

4. Waana bishaareeye u dige ah, waase ka jeedsadeen badankoodu waxna ma maqlayaan.

بَشِيرًا وَنَذِيرًا فَأَعْرَضَ أَكْثَرُهُمْ فَهُمْ لَا يَسْمَعُونَ ﴿٤﴾

5. Waxayna dheheen quluubtannadu waxay kaga sugan tahay dabool waxaad noogu yeedhi, dhagahannagana waxaa kaga jira culeys, dhexdannada iyo adigana waxaa ah xijaab, ee camal fal annana waan camal faleynaaye.

وَقَالُوا۟ قُلُوبُنَا فِىٓ أَكِنَّةٍ مِّمَّا تَدْعُونَآ إِلَيْهِ وَفِىٓ ءَاذَانِنَا وَقْرٌ وَمِنۢ بَيْنِنَا وَبَيْنِكَ حِجَابٌ فَٱعْمَلْ إِنَّنَا عَٰمِلُونَ ﴿٥﴾

6. Waxaad dhahdaa Nabiyow anigu waxaan uun ahay bashar (dad) idinkoo kale ah, waxaana la ii waxyooday in macbuudkiinnu mid kaliya yahay, ee u toosnaada

قُلْ إِنَّمَآ أَنَا۠ بَشَرٌ مِّثْلُكُمْ يُوحَىٰٓ إِلَىَّ أَنَّمَآ إِلَٰهُكُمْ إِلَٰهٌ وَٰحِدٌ فَٱسْتَقِيمُوٓا۟ إِلَيْهِ وَٱسْتَغْفِرُوهُ ۗ وَوَيْلٌ لِّلْمُشْرِكِينَ ﴿٦﴾

xaggiisa, kana dambidhaaf waydiista, halaagna wuxuu u sugnaaday mushrikiinta.

7. Kuwaan bixinnin sakada (sadaqada) ahna aakhiro kuwa ka gaaloobey.

8. Kuwa xaqa rumeeyeyse oo camal fiican falay waxaa u sugnaaday ajri aan guraynin.

ٱلَّذِينَ لَا يُؤْتُونَ ٱلزَّكَوٰةَ وَهُم بِٱلْءَاخِرَةِ هُمْ كَٰفِرُونَ ﴿٧﴾

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ لَهُمْ أَجْرٌ غَيْرُ مَمْنُونٍ ﴿٨﴾

Quraanka oo aayadihiisa cadcad yihiin Alle ayaa u soo dajiyey isagoo carabi ah ciddii garan, bishaareeye diga ah, dadka badidiise waa ka jeedsadeen, mana maqlaan waxayna sheegteen inay qalbiga ka daboolan yihiin, dhagahana ka culus yihiin xaqana xijaab ka xigo, Nabiguse waa bashar waxaana loo waxyooday in Alle kaliya ilaah yahay, lana toosnaado dambi dhaafna la wardaso waxaana halaagsamay gaaladaan zakada (sadaqada) bixinnin aakhirana diidday. Waxaase ajri aan go'ayn mudan kuwa xaq rumayn iyo camal fiican isku daray. **[Fussilat: l-8].**

9. Waxaad dhahdaa Nabiyow idinku ma waxaad ka gaaloobaysaan Allaha ku abuuray dhulka laba maalmood, ood u yeelaysaan kuwo la mid ah, kaasi waa Rabbiga caalamka.

10. Wuxuuna yeelay dhulka dhexdiisa buuro wuuna barakeeyey dhexdiisa una qadaray (u qiyaasay) cunnadiisa afar maalmood iyadooy u siman tahay dadka weydiin.

11. Markaasuu Alle u kor noqday cirka oo qiiq ah kuna yidhi cirka iyo dhulka ahaada idinkoo adeecsan ama la ikraahi (la qasbi) waxayna dheheen waan nimid annagoo adeecsan.

۞ قُلْ أَئِنَّكُمْ لَتَكْفُرُونَ بِٱلَّذِى خَلَقَ ٱلْأَرْضَ فِى يَوْمَيْنِ وَتَجْعَلُونَ لَهُۥٓ أَندَادًا ۚ ذَٰلِكَ رَبُّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٩﴾

وَجَعَلَ فِيهَا رَوَٰسِىَ مِن فَوْقِهَا وَبَٰرَكَ فِيهَا وَقَدَّرَ فِيهَآ أَقْوَٰتَهَا فِىٓ أَرْبَعَةِ أَيَّامٍ سَوَآءً لِّلسَّآئِلِينَ ﴿١٠﴾

ثُمَّ ٱسْتَوَىٰٓ إِلَى ٱلسَّمَآءِ وَهِىَ دُخَانٌ فَقَالَ لَهَا وَلِلْأَرْضِ ٱئْتِيَا طَوْعًا أَوْ كَرْهًا قَالَتَآ أَتَيْنَا طَآئِعِينَ ﴿١١﴾

فَقَضَىٰهُنَّ سَبۡعَ سَمَٰوَاتٖ فِي يَوۡمَيۡنِ وَأَوۡحَىٰ فِي كُلِّ سَمَآءٍ أَمۡرَهَاۚ وَزَيَّنَّا ٱلسَّمَآءَ ٱلدُّنۡيَا بِمَصَٰبِيحَ وَحِفۡظٗاۚ ذَٰلِكَ تَقۡدِيرُ ٱلۡعَزِيزِ ٱلۡعَلِيمِ ١٢

12. Wuxuuna Alle ka abuuray cirka toddobo samo laba maalmood wuxuuna faray samo kasta amarkeedii, waxaanna ku qurxinnay cirka dhaw misbaaxyo, waana ilaalinnay, taasina waa qadaridda (maamulka) Allaha adkaada ee wax og.

Ma habboona in laga gaaloobo Allaha wax walba abuuray sida dhulka, cirka iyo wax kasta mana habboona in loo yeelo wax la mid ah oo lala caabudo, illeen isagaa inoo barakeeyey dhulka iyo cirka, kana yeelay wadada noolaanshaha, mid kasta u darbay wax looga baahan yahay, aayadahan iyo kuwa kalee ka warrami abuurka cirka iyo dhulka wax is diidaya ama iska hor iman ma aha, ibnu cabaas waxaa laga wariyey inuu Alle dhulka ku abuuray laba maalmood, markaas cirka abuuray, dhulka fidiyey, fidinteeduna waa inuu ka soo bixiyey biyo, carro, yeeleyna buuro, bacaad iyo tuurar waxayna noqotay muddadu lix bari. Saas darteed wax iska hor imaan iyo wax is burin midna ma jiro, kaasaana Allaha xaqa ah ayna waajibtay in si dhab ah loo caabudo sharcigiisana loo raaco loona gaadhsiiyo caalamka si habboon. **[Fussilat: 9-12].**

فَإِنۡ أَعۡرَضُواْ فَقُلۡ أَنذَرۡتُكُمۡ صَٰعِقَةٗ مِّثۡلَ صَٰعِقَةِ عَادٖ وَثَمُودَ ١٣

13. Hadday ka jeedsadeen gaaladu (xaqa) waxaad ku dhahdaa Nabiyow waxaan idiinka digi cadaab daran oo la mid ah kii reer caad iyo thamuud.

إِذۡ جَآءَتۡهُمُ ٱلرُّسُلُ مِنۢ بَيۡنِ أَيۡدِيهِمۡ وَمِنۡ خَلۡفِهِمۡ أَلَّا تَعۡبُدُوٓاْ إِلَّا ٱللَّهَۖ قَالُواْ لَوۡ شَآءَ رَبُّنَا لَأَنزَلَ مَلَٰٓئِكَةٗ فَإِنَّا بِمَآ أُرۡسِلۡتُم بِهِۦ كَٰفِرُونَ ١٤

14. Markay ugaga timid rasuulladii hor iyo gadaalba, iyagoo ku leh ha caabudina waxaan Alle ahayn, ayna ku dhaheen hadduu doono Alleheen wuxuu soo dajin lahaa malaa'ig, anaguna waxa laydin la soo diray waan ka gaaloownay.

فَأَمَّا عَادٞ فَٱسۡتَكۡبَرُواْ فِي ٱلۡأَرۡضِ بِغَيۡرِ ٱلۡحَقِّ وَقَالُواْ مَنۡ أَشَدُّ مِنَّا قُوَّةًۖ أَوَلَمۡ يَرَوۡاْ أَنَّ ٱللَّهَ ٱلَّذِي خَلَقَهُمۡ هُوَ أَشَدُّ مِنۡهُمۡ قُوَّةٗۖ وَكَانُواْ بِـَٔايَٰتِنَا يَجۡحَدُونَ ١٥

15. Reer caad iyagu way isku kibriyeen dhulka xaq darro, waxayna dheheen yaa naga xoog badan, miyeyna arag Allaha abuuray inuu ka xoog badan

yahay waxayna ahaayeen kuwo aayaadkannaga diiddan.

16. Waxaanna ku dirray korkooda dabayl qaylo daran todobo maalmood oo u xun (iyaga) si aan u dhandhansiinno cadaabka dulliga nolosha adduun, cadaabka aakhiraana ka sii dulli badan loomana gargaaro.

فَأَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ رِيحًا صَرْصَرًا فِىٓ أَيَّامٍ نَّحِسَاتٍ لِّنُذِيقَهُمْ عَذَابَ ٱلْخِزْىِ فِى ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا ۖ وَلَعَذَابُ ٱلْءَاخِرَةِ أَخْزَىٰ ۖ وَهُمْ لَا يُنصَرُونَ ﴿١٦﴾

Wuxuu Alle faray Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) inuu hadday gaaladu ka jeedsadaan xaqa uu uga digo ciqaab daran oo la mid ah tii Caad iyo Thamuud, markay rasuulladoodii fareen inay Alle kaliya caabudaan ayna diideen iskibriyeenna xumaan darteed. Markaas caad Alle ku halaagay dabeyl daran ayna dhadhamiyeen cadaabkii dulliga iyadoo aakhiro cadaabkeedana u dheer yahay, aayaduhuna waxay caddayn ku sugnaanta xaqa, in Alle ciqaabi xaqdiide, in rasuulladii u wada yeedhi jireen cibaadada Alle kaliya, in xoogga iyo quwada Alle wax walba ka daran tahay, waajibna tahay in laga dhawrsado. **[Fussilat: 13-16].**

17. Reer thamuud waxaan tusinnay xaqa, waxayna ka jeclaadeen indho la'aan (baadi) hanuunkii, waxaana qabtay qaylo cadaab wax dulleeya, waxay kasbanayeen darteed.

وَأَمَّا ثَمُودُ فَهَدَيْنَٰهُمْ فَٱسْتَحَبُّوا۟ ٱلْعَمَىٰ عَلَى ٱلْهُدَىٰ فَأَخَذَتْهُمْ صَٰعِقَةُ ٱلْعَذَابِ ٱلْهُونِ بِمَا كَانُوا۟ يَكْسِبُونَ ﴿١٧﴾

18. Waxaanna korinnay kuwii rumeeyey (xaqa) oo dhawrsan jiray.

وَنَجَّيْنَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَكَانُوا۟ يَتَّقُونَ ﴿١٨﴾

19. (U sheeg gaalada) maalinta lagu kulmin colka Alle naarta iyagoo is cidhiidhyi oo la hori.

وَيَوْمَ يُحْشَرُ أَعْدَآءُ ٱللَّهِ إِلَى ٱلنَّارِ فَهُمْ يُوزَعُونَ ﴿١٩﴾

20. Markay yimaaddaanna uu ku marag furo korkooda, maqalkoodu, araggoodu, iyo haraggoodu (jidhkoodu) waxay fali jireen.

حَتَّىٰٓ إِذَا مَا جَآءُوهَا شَهِدَ عَلَيْهِمْ سَمْعُهُمْ وَأَبْصَٰرُهُمْ وَجُلُودُهُم بِمَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿٢٠﴾

21. Ayna ku dhahaan korkooda (jidhkooda) maxaad noogu marag kacdeen, ayna ku dhahaan waxaa naga hadliyey, Allaha ka hadliya wax kasta (oo hadla), isagaana idin abuuray markii hore, xaggiisaa laydiin celin.

وَقَالُواْ لِجُلُودِهِمْ لِمَ شَهِدتُّمْ عَلَيْنَا ۖ قَالُوٓاْ أَنطَقَنَا ٱللَّهُ ٱلَّذِىٓ أَنطَقَ كُلَّ شَىْءٍ وَهُوَ خَلَقَكُمْ أَوَّلَ مَرَّةٍ وَإِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿٢١﴾

22. Mana aydaan ahayn kuwa iska astura inay idinku ku marag kacaan maqalkiinnu, araggiinnu iyo haraggiinnu, waxaadse u malayseen inuusan Alle ogayn wax badan ood falaysaan.

وَمَا كُنتُمْ تَسْتَتِرُونَ أَن يَشْهَدَ عَلَيْكُمْ سَمْعُكُمْ وَلَآ أَبْصَٰرُكُمْ وَلَا جُلُودُكُمْ وَلَٰكِن ظَنَنتُمْ أَنَّ ٱللَّهَ لَا يَعْلَمُ كَثِيرًا مِّمَّا تَعْمَلُونَ ﴿٢٢﴾

23. Kaasina waa malihiinnii aad u malayseen Rabbigiin, isagaana idin halaagay, waxaadna ahaateen kuwo khasaaray.

وَذَٰلِكُمْ ظَنُّكُمُ ٱلَّذِى ظَنَنتُم بِرَبِّكُمْ أَرْدَىٰكُمْ فَأَصْبَحْتُم مِّنَ ٱلْخَٰسِرِينَ ﴿٢٣﴾

24. Hadday samraanna naar bay ku hoyan hadday cudur daar dalbaanna lagama aqbalo.

فَإِن يَصْبِرُواْ فَٱلنَّارُ مَثْوًى لَّهُمْ ۖ وَإِن يَسْتَعْتِبُواْ فَمَا هُم مِّنَ ٱلْمُعْتَبِينَ ﴿٢٤﴾

Thamuudna wax badan buu quraanku ka warramey xaalkooda iyo siday xaqa u beeniyeen iyo sidii loo halaagay, gaalana Alle dhammaan wuu kulmin wuxuuna ku uruurin naarta, waana in la ogaado inuu jidhkaagu kugu marag furi waana waajib in xumaanta laga fogaado si ayan kuugu marag furin xubnahaagu, wax walbana Alle ayaa ka hadliya. Ciddii malaysa inaan Alle ogayn wuxuu fali ama uusan koobin wax walba waa cid khasaartay. **[Fussilat: 17-24].**

25. Waxaan u darabnay gaalada saaxiibbo u qurxiya waxa ka horreeya, iyo waxa ka dambeeya, waxaana ku dhaboobay (oo ku sugnaaday) hadalkii Alle iyagoo ummada kale ku dhex sugan (oo la cadaabi) oo ka horreeyey jinni iyo insina leh, waxayna ahaayeen kuwo khasaaray.

* وَقَيَّضْنَا لَهُمْ قُرَنَآءَ فَزَيَّنُواْ لَهُم مَّا بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَمَا خَلْفَهُمْ وَحَقَّ عَلَيْهِمُ ٱلْقَوْلُ فِىٓ أُمَمٍ قَدْ خَلَتْ مِن قَبْلِهِم مِّنَ ٱلْجِنِّ وَٱلْإِنسِ ۖ إِنَّهُمْ كَانُواْ خَٰسِرِينَ ﴿٢٥﴾

وَقَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لَا تَسۡمَعُواْ لِهَٰذَا ٱلۡقُرۡءَانِ وَٱلۡغَوۡاْ فِيهِ لَعَلَّكُمۡ تَغۡلِبُونَ ﴿٢٦﴾

26. Waxay dhaheen kuwii gaaloobay ha maqlina quraanka kuna qaylya (marka la akhrin) waxaad u dhaw dihiin inaad adkaataane.

فَلَنُذِيقَنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ عَذَابٗا شَدِيدٗا وَلَنَجۡزِيَنَّهُمۡ أَسۡوَأَ ٱلَّذِي كَانُواْ يَعۡمَلُونَ ﴿٢٧﴾

27. Waxaan dhadhansiinaynaa kuwii gaaloobay cadaab daran, waxaanna ka abaalmarinaynaa kii ugu xumaa waxay camal falayeen.

ذَٰلِكَ جَزَآءُ أَعۡدَآءِ ٱللَّهِ ٱلنَّارُۖ لَهُمۡ فِيهَا دَارُ ٱلۡخُلۡدِ جَزَآءَۢ بِمَا كَانُواْ بِـَٔايَٰتِنَا يَجۡحَدُونَ ﴿٢٨﴾

28. Kaasi waa abaalmarinta colka Alle, waxayna gali naar iyadoo u noqon guri waarid, iyagoo laga abaal marin aayaadkannaga ay diideen.

وَقَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ رَبَّنَآ أَرِنَا ٱلَّذَيۡنِ أَضَلَّانَا مِنَ ٱلۡجِنِّ وَٱلۡإِنسِ نَجۡعَلۡهُمَا تَحۡتَ أَقۡدَامِنَا لِيَكُونَا مِنَ ٱلۡأَسۡفَلِينَ ﴿٢٩﴾

29. Waxay dheheen kuwii gaaloobay Allow na tusi labadaas na dhumiyey oo jinni iyo insi ah aan yeello gomadahannaga hoostoodee si ay u noqdaan kuwo ku hooseeya (naarta).

Alle isagaa awoodda leh wuxuu doonana fali, gaaladana markey jidka wanaagga ka leexdeen yuu Alle ku lammaaneeyey mid kasta shaydaan u qurxiya xumaanta, halmaansiiyana wanaagga, illeen ciqaabaa u waajibta, wayna khasaareen, waxayna ahaayeen kuwo quraanka ku ciyaara kuna qaylya waqtiga la akhrin si ay u waswaasiyaan, waxaana lagu abaalmarin cadaab daran, waxaana laga abaalmarin camalkoodii xumaa, waana abaalka colka Alle saasi, waxayna ku waari naar daran iyagoo Alle warsan inuu tusiyo kuwii dhumiyey jinni iyo insiba si ay ugu istaagaan naarta dhexdeeda una yeelaan cagahooda hoostooda. Maxayse tari taasi mar hadday naar galeen, xadiithna waxaa ku sugnaaday: in ruux kastoo gardarro loo dilo uu qeyb ku yeelan ina Nabi Aadamkii dilka billaabay. **[Fussilat: 25-29].**

إِنَّ ٱلَّذِينَ قَالُواْ رَبُّنَا ٱللَّهُ ثُمَّ ٱسۡتَقَٰمُواْ تَتَنَزَّلُ عَلَيۡهِمُ ٱلۡمَلَٰٓئِكَةُ أَلَّا تَخَافُواْ وَلَا تَحۡزَنُواْ وَأَبۡشِرُواْ بِٱلۡجَنَّةِ ٱلَّتِي كُنتُمۡ تُوعَدُونَ ﴿٣٠﴾

30. Kuwa yidhi Rabbigeen waa Alle haddana toosnaaday waxaa ku soo dagta malaa'igta (markey dhiman iyadoo ku dhihi) ha cabsannina hana murugoonnina, kuna bishaareysta jannadii laydiin yaboohay.

نَحْنُ أَوْلِيَآؤُكُمْ فِى ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا وَفِى ٱلْآخِرَةِ ۖ وَلَكُمْ فِيهَا مَا تَشْتَهِىٓ أَنفُسُكُمْ وَلَكُمْ فِيهَا مَا تَدَّعُونَ ﴿٣١﴾

31. Annagaa sokeeye idiin ah nolosha adduunyo iyo aakhiraba, waxaana idiin sugnaaday dhexdeeda waxay doonto naftiinnu waxaadna ka heleysaan waxaad dalabtaan.

نُزُلًا مِّنْ غَفُورٍ رَّحِيمٍ ﴿٣٢﴾

32. Waana martiqaadka Allaha dambi dhaafa ee naxariista.

وَمَنْ أَحْسَنُ قَوْلًا مِّمَّن دَعَآ إِلَى ٱللَّهِ وَعَمِلَ صَٰلِحًا وَقَالَ إِنَّنِى مِنَ ٱلْمُسْلِمِينَ ﴿٣٣﴾

33. Yaa ka fiican hadal ruux ugu yeedhay (dadka) Alle xaggiisa, oo camal fiican sameeyey, oo dhaha anigu waxaan ka mid ahay muslimiinta.

وَلَا تَسْتَوِى ٱلْحَسَنَةُ وَلَا ٱلسَّيِّئَةُ ۚ ٱدْفَعْ بِٱلَّتِى هِىَ أَحْسَنُ فَإِذَا ٱلَّذِى بَيْنَكَ وَبَيْنَهُۥ عَدَٰوَةٌ كَأَنَّهُۥ وَلِىٌّ حَمِيمٌ ﴿٣٤﴾

34. Mana eka wanaag iyo xumaan, reebna oo (ku celi xumaanta) arrinta fiican markaas waxaa soo bixi in midkii col idin dhexyiil uu noqon sokeeye iyo saaxiib.

وَمَا يُلَقَّىٰهَآ إِلَّا ٱلَّذِينَ صَبَرُوا۟ وَمَا يُلَقَّىٰهَآ إِلَّا ذُو حَظٍّ عَظِيمٍ ﴿٣٥﴾

35. Lalamana kulmiyo arrintaas kuwii samrey mooyee, lalamana kulmiyo mid nasiib weyn leh mooyee.

Sufyaan binu Cabdullaahi waxaa laga wariyey inuu yidhi: Rasuulkii Allow ii sheeg arrin aan isku ilaaliyo, Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) wuxuu yidhi: (dheh Rabbigey cibaadada iga mudan waa Alle kuna toosnoow, waxaan idhi: maxaad iigu cabsi badan tahay, markaasuu qabtay caaradda carrabkiisa, oo yidhi: kan) waxaa wariyey Tirmidi, Axmed iyo Ibnu Maajah. Waxayna ku tusin wanaagga toosnaanta iyo in Alle dartiis loogu yeedho dadka, laguna faano islaamnimada een laga xishoon, xumaan iyo wanaagna ma sinna ee had iyo jeer wanaagga ku dhaqan ha ku jeclaado xaataa midka colka kula ahe, waxaa saas yeeli ruux fiican oo ehelu khayr ah, had iyo jeerna Alle ka magan gala shaydaan iyo was waaskiisa waana kaas islaamka toosan ee xaqa ah ee habboon. **[Fussilat: 30-35].**

وَإِمَّا يَنزَغَنَّكَ مِنَ ٱلشَّيْطَٰنِ نَزْغٌ

36. Hadduu ku waswaasiyo shaydaan xaggiisa waswaasiye ka

magangal Alle isagaa wax maqla waxna oge.

37. Aayaadka Alle (jiriddiisa iyo qudradiisa) waxaa ka mid ah habeenka, maalinta, qorraxda iyo dayaxa, ha u sujuudina qorraxda iyo dayaxa ee u sujuuda Allaha abuuray haddaad tihiin kuwo (dhab) u caabudi.

38. Haday iska kibriyaan (cibaadada) kuwa Allehaa agtiisa ah way u tasbiixsadaan habeen iyo dharaarba kana noogin.

39. Aayaadka Alle waxaa ka mid ah inaad aragtid dhulkoo dulleysan (abaar ah) markaan ku soo dajinno biyaha uu gilgisho soona kor noqdo, midka nooleeyey wuxuu nooleyn wixii dhintay, wax walbana wuu karaa.

40. Kuwa iilaya aayaadkannaga nagama qarsoona, ruux lagu tuuray naarta miyaa khayrroon mise mid isagoo aamin ah imaan qiyaamada, fala waxaad doontaan, Alle waxaad faleysaan waa arkaa.

41. Kuwa ka gaaloobay quraanka markuu u yimid (waa la abaal marin) waana kitaab qaali ah (oo xoog leh, oo adkaada).

42. Mana timaado xumaan hortiisa iyo gadaashiisa, (waa dhawran yahay) waana soo dajinta Allaha falka san ee la mahdiyo.

فَٱسْتَعِذْ بِٱللَّهِ ۖ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْعَلِيمُ ﴿٣٦﴾

وَمِنْ ءَايَٰتِهِ ٱلَّيْلُ وَٱلنَّهَارُ وَٱلشَّمْسُ وَٱلْقَمَرُ ۚ لَا تَسْجُدُوا۟ لِلشَّمْسِ وَلَا لِلْقَمَرِ وَٱسْجُدُوا۟ لِلَّهِ ٱلَّذِى خَلَقَهُنَّ إِن كُنتُمْ إِيَّاهُ تَعْبُدُونَ ﴿٣٧﴾

فَإِنِ ٱسْتَكْبَرُوا۟ فَٱلَّذِينَ عِندَ رَبِّكَ يُسَبِّحُونَ لَهُۥ بِٱلَّيْلِ وَٱلنَّهَارِ وَهُمْ لَا يَسْـَٔمُونَ ﴿٣٨﴾

وَمِنْ ءَايَٰتِهِۦٓ أَنَّكَ تَرَى ٱلْأَرْضَ خَٰشِعَةً فَإِذَآ أَنزَلْنَا عَلَيْهَا ٱلْمَآءَ ٱهْتَزَّتْ وَرَبَتْ ۚ إِنَّ ٱلَّذِىٓ أَحْيَاهَا لَمُحْىِ ٱلْمَوْتَىٰٓ ۚ إِنَّهُۥ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿٣٩﴾

إِنَّ ٱلَّذِينَ يُلْحِدُونَ فِىٓ ءَايَٰتِنَا لَا يَخْفَوْنَ عَلَيْنَا ۗ أَفَمَن يُلْقَىٰ فِى ٱلنَّارِ خَيْرٌ أَم مَّن يَأْتِىٓ ءَامِنًا يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ ۚ ٱعْمَلُوا۟ مَا شِئْتُمْ إِنَّهُۥ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿٤٠﴾

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ بِٱلذِّكْرِ لَمَّا جَآءَهُمْ ۖ وَإِنَّهُۥ لَكِتَٰبٌ عَزِيزٌ ﴿٤١﴾

لَّا يَأْتِيهِ ٱلْبَٰطِلُ مِنۢ بَيْنِ يَدَيْهِ وَلَا مِنْ خَلْفِهِۦ ۖ تَنزِيلٌ مِّنْ حَكِيمٍ حَمِيدٍ ﴿٤٢﴾

43. Lagumana dhaho waxaan ahayn wixii lagu yidhi rasuulladii kaa horreeyey, Rabbigaana waa dambi dhaafe ciqaab daran.

مَّا يُقَالُ لَكَ إِلَّا مَا قَدْ قِيلَ لِلرُّسُلِ مِن قَبْلِكَ ۚ إِنَّ رَبَّكَ لَذُو مَغْفِرَةٍ وَذُو عِقَابٍ أَلِيمٍ ﴿٤٣﴾

Had iyo jeer shaydaanku wuxuu u darban yahay inuu dadka waswaasiyo xaqana ka leexiyo waxaase lagaga nabad gali karaa isagoo Alle la magan galo laguna xidhnaado illeen waa maqle oge. Alle calaamaadka awoodda iyo jiriddiisa waxaa ka mid ah abuurkiisa, sida: habeenka, maalinta, qorraxda iyo dayaxa, wax sujuud mudan oo aan Alle ahayn ma jiro, ciddii isla waynaata oo cibaadada diidda waxba Alle ugama baahna waxaa malaa'igtu Alle qadasi habeen iyo dharaar si joogta ahoon daal lahayn. Ciddii soo bixin diiddana ha eegto roobka iyo dhulka, ciddiise leexisa quraanka oo ku ciyaarta macnihiisa iyo fasirkiisa iyo si kasta Alle kama qarsoona wuuna abaal marin, cid naar lagu tuurayna la mid ma aha mid ka nabadgashay qiyaamada, kitaabka quraanka ahna waa kitaab qaali ah oo xumaan ka dheer ciddii diidda ama ku dhaqmi wayda Alle ayaa abaalmarin, gaalana inay hadal xun ku dhahaan rasuullada caaday u tahay waase laga abaalmarin. **[Fussilat: 36-43].**

44. Haddaan ka yeelno «kitaabka» quraan cajami ah waxay dhihi lahaayeen maxaa loo caddayn waayey aayaadkiisa, ma (quraan) cajami ah iyo Nabi (carabi ah). Waxaad dhahdaa isagu kuwa rumeeyey wuxuu u yahay hanuun iyo caafimaad, kuwa aan rumeyninna dhagahooda waxaa ah culays, waana ka indha la' yihiin, kuwaasna waxaa looga yeedhi meel fog. (Waa tusaale sida aanay wax u maqlaynin, xaqana u aqbalaynin, sida iyadoo meel fog looga dhawaaqaayo oyna maqlayn ka u dhawaaqi).

وَلَوْ جَعَلْنَٰهُ قُرْءَانًا أَعْجَمِيًّا لَّقَالُوا۟ لَوْلَا فُصِّلَتْ ءَايَٰتُهُۥٓ ۖ ءَا۬عْجَمِىٌّ وَعَرَبِىٌّ ۗ قُلْ هُوَ لِلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ هُدًى وَشِفَآءٌ ۖ وَٱلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ فِىٓ ءَاذَانِهِمْ وَقْرٌ وَهُوَ عَلَيْهِمْ عَمًى ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ يُنَادَوْنَ مِن مَّكَانٍۭ بَعِيدٍ ﴿٤٤﴾

45. Dhab ahaan baan u siinnay Nabi Muuse kitaabka waana laysku khilaafay, haddayan jirin kalimo ka hormartay Allehaa waa la kala xukmin lahaa dhexdooda

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا مُوسَى ٱلْكِتَٰبَ فَٱخْتُلِفَ فِيهِ ۗ وَلَوْلَا كَلِمَةٌ سَبَقَتْ مِن رَّبِّكَ لَقُضِىَ بَيْنَهُمْ ۚ وَإِنَّهُمْ لَفِى شَكٍّ مِّنْهُ مُرِيبٍ ﴿٤٥﴾

waxayna ku sugan yihiin gaaladu shaki daran.

46. Ruuxii camal fiican fala wuxuu u falay naftiisa, ruuxii xumaan fala wuxuu dhibay naftiisa, Rabbigaana ma aha dulmiyaha addoommada.

مَّنْ عَمِلَ صَٰلِحًا فَلِنَفْسِهِۦ ۖ وَمَنْ أَسَآءَ فَعَلَيْهَا ۗ وَمَا رَبُّكَ بِظَلَّٰمٍ لِّلْعَبِيدِ ﴿٤٦﴾

47. Xaggiisaana loo celiyaa ogida saacadda (qiyaame), midhana kama soo baxaan sabuulkooda, mana uuroobo dhadig mana dhalo ogaanshaha Alle la'aantiis, maalintuu ku dhihi away kuwaad ila wadaajiseenna waxay dhihi waxaan ku ogaysiinnay naga mid ma aha ruux marag furi arrintaas.

* إِلَيْهِ يُرَدُّ عِلْمُ ٱلسَّاعَةِ ۚ وَمَا تَخْرُجُ مِن ثَمَرَٰتٍ مِّنْ أَكْمَامِهَا وَمَا تَحْمِلُ مِنْ أُنثَىٰ وَلَا تَضَعُ إِلَّا بِعِلْمِهِۦ ۚ وَيَوْمَ يُنَادِيهِمْ أَيْنَ شُرَكَآءِى قَالُوٓا۟ ءَاذَنَّٰكَ مَا مِنَّا مِن شَهِيدٍ ﴿٤٧﴾

48. Waxaa ka dhumey waxay ahaayeen kuwo baryo (caabuda) horey, waxayna yaqiinsadeen inuusan u sugnaan gargaare.

وَضَلَّ عَنْهُم مَّا كَانُوا۟ يَدْعُونَ مِن قَبْلُ ۖ وَظَنُّوا۟ مَا لَهُم مِّن مَّحِيصٍ ﴿٤٨﴾

Alle wuxuu ku soo diraa Nabi walba afka dadka uu ka dhex bixiyey Nabigana wuxuu Alle ku soo diray af carabi isagoo caalamka dhammaan loo diray. Mana habboona in afkale lagu diro, quraankuna waa wanaagga ciddii rumeysa iyo xujada cidda diidda, oo baadi ku fogaata, qisada Nabi Muusana wax badanbaa quraanka lagu soo celceliyaa si loo eego arrintaas, wanaaggu wuu ku anfci xumaantuna adi uunbey ku dhibi Alle na wax ma dulmo, wax walbana waa ogyahay. Wixii ka soo hadhay oo la caabudona waa been aan wax ka jirin. **[Fussilat: 44-48].**

49. Dadku kama daalo baryada khayrka, hadduu taabto sharra wuu quusasha badan yahay.

لَّا يَسْـَٔمُ ٱلْإِنسَٰنُ مِن دُعَآءِ ٱلْخَيْرِ وَإِن مَّسَّهُ ٱلشَّرُّ فَيَـُٔوسٌ قَنُوطٌ ﴿٤٩﴾

50. Haddaan dhadhansiinno naxariis xaggannaga ka timid dhib taabtay ka dib, wuxuu

وَلَئِنْ أَذَقْنَٰهُ رَحْمَةً مِّنَّا مِنۢ بَعْدِ ضَرَّآءَ مَسَّتْهُ لَيَقُولَنَّ هَٰذَا لِى وَمَآ أَظُنُّ ٱلسَّاعَةَ

dhahaa kan anaa iska leh mana u maleeynaayo inay saacadda (qiyaame) kici, haddii lay celiyo Rabbigeyna waxaan ku leeyahay agtiisa wanaag, dhab ahaan baan ugu warrameynaa kuwii gaaloobey waxay camal faleen, waxaanna dhab ahaan u dhadhansiinaynaa cadaab daran.

قَآئِمَةً وَلَئِن رُّجِعْتُ إِلَىٰ رَبِّيٓ إِنَّ لِي عِندَهُۥ لَلْحُسْنَىٰ ۚ فَلَنُنَبِّئَنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ بِمَا عَمِلُوا۟ وَلَنُذِيقَنَّهُم مِّنْ عَذَابٍ غَلِيظٍ ﴿٥٠﴾

51. Markaan u nicmeyno dadka wuu jeedsadaa (daacadduu ka tagaa) oo is dadbaa (kibir daraaddiis) markuu taabto dhibna wuxuu soo baxaa isagoo baryo badan.

وَإِذَآ أَنْعَمْنَا عَلَى ٱلْإِنسَٰنِ أَعْرَضَ وَنَـَٔا بِجَانِبِهِۦ وَإِذَا مَسَّهُ ٱلشَّرُّ فَذُو دُعَآءٍ عَرِيضٍ ﴿٥١﴾

52. Waxaad ku dhahdaa bal ka warrama hadduu quraankani xagga Alle ka yimid markaas aad ka gaaloowdaan yaa ka baadi badan ruux gaalnimo iyo khilaaf fog ku sugan.

قُلْ أَرَءَيْتُمْ إِن كَانَ مِنْ عِندِ ٱللَّهِ ثُمَّ كَفَرْتُم بِهِۦ مَنْ أَضَلُّ مِمَّنْ هُوَ فِى شِقَاقٍۭ بَعِيدٍ ﴿٥٢﴾

53. Waxaannu ka tusin aayaadkannaga jahooyinka iyo naftooda intey uga caddaato inuu quraanku xaq yahay, miyuuna ku filleyn Alle inuu wax kaste og yahay.

سَنُرِيهِمْ ءَايَٰتِنَا فِى ٱلْءَافَاقِ وَفِىٓ أَنفُسِهِمْ حَتَّىٰ يَتَبَيَّنَ لَهُمْ أَنَّهُ ٱلْحَقُّ ۗ أَوَلَمْ يَكْفِ بِرَبِّكَ أَنَّهُۥ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ شَهِيدٌ ﴿٥٣﴾

54. Waxayna gaaladu kaga sugan yihiin shaki la kulanka Alle, Alle na wax kasta wuu koobay.

أَلَآ إِنَّهُمْ فِى مِرْيَةٍ مِّن لِّقَآءِ رَبِّهِمْ ۗ أَلَآ إِنَّهُۥ بِكُلِّ شَىْءٍ مُّحِيطٌ ﴿٥٤﴾

Baryada Alle iyo rajeyntiisa yaa sharaf leh oo fiican, mase habboona in waqtiga dhibkana la baryo waqtiga ladnaantana la halmaamo oo la inkiro lana gaaloobo xaqana laga jeedsado, iyadoo la sheegan in wanaag u jiro Alle agtiisa, mase aha saas, maxayse gaalo heli oo wanaag ah hadday beeniyaan quraanka xaqa ah ee Alle xaggiisa ka yimid, yaase ka gaalnimo badan cidda saas fasha, xaqnimada quraankana waxaa laga tusin dadka jahooyinka iyo naftooda, waxaana maalin kasta soo bixi xaqnimada quraanka iyo islaamka, Rabbi ayaana marag ku filan ciddii shakida la kulankiisana way halaagsami illeen Alle wax walba wuu koobaye. **[Fussilat: 49-54].**

Suurat Ash-Shuuraa

سُورَةُ الشُّورَىٰ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1-2. Waxay ku tusin mucjisada quraanka.

حمٓ ﴿١﴾ عٓسٓقٓ ﴿٢﴾

3. Sida waxyiga laguugu soo dajiyey Nabiyoow yaa Nabiyadii horana loogu waxyooday, waxaana waxyooda Allaha adkaada ee falka san.

كَذَٰلِكَ يُوحِيٓ إِلَيۡكَ وَإِلَى ٱلَّذِينَ مِن قَبۡلِكَ ٱللَّهُ ٱلۡعَزِيزُ ٱلۡحَكِيمُ ﴿٣﴾

4. Waxaa u sugnaaday waxa samada iyo dhulka ku sugan, Alle na waa sarreeyaha weyn.

لَهُۥ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلۡأَرۡضِۖ وَهُوَ ٱلۡعَلِيُّ ٱلۡعَظِيمُ ﴿٤﴾

5. Waxay u dhawdahay samooyinku inay ku dildillaacaan korkooda, malaa'igtuna waxay ku tasbiixsan mahadda Rabbigood, waxayna u dambidhaaf warsan kuwa dhulka ku sugan (dadka), Alle na waa dambidhaafe naxariista.

تَكَادُ ٱلسَّمَٰوَٰتُ يَتَفَطَّرۡنَ مِن فَوۡقِهِنَّۚ وَٱلۡمَلَٰٓئِكَةُ يُسَبِّحُونَ بِحَمۡدِ رَبِّهِمۡ وَيَسۡتَغۡفِرُونَ لِمَن فِي ٱلۡأَرۡضِۗ أَلَآ إِنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلۡغَفُورُ ٱلرَّحِيمُ ﴿٥﴾

6. Kuwa yeeshay Alle ka sokoow owliyo Alle waa ogyahay korkooda (wuu daalacan) adiguna kama tihid wakiil.

وَٱلَّذِينَ ٱتَّخَذُواْ مِن دُونِهِۦٓ أَوۡلِيَآءَ ٱللَّهُ حَفِيظٌ عَلَيۡهِمۡ وَمَآ أَنتَ عَلَيۡهِم بِوَكِيلٖ ﴿٦﴾

وَكَذَٰلِكَ أَوۡحَيۡنَآ إِلَيۡكَ قُرۡءَانًا عَرَبِيًّا لِّتُنذِرَ أُمَّ ٱلۡقُرَىٰ وَمَنۡ حَوۡلَهَا وَتُنذِرَ يَوۡمَ ٱلۡجَمۡعِ لَا رَيۡبَ فِيهِۚ فَرِيقٞ فِي ٱلۡجَنَّةِ وَفَرِيقٞ فِي ٱلسَّعِيرِ ٧

7. (Sidaan ugu waxyoonnay Nabiyadii hore) yaan adigana Nabiyoow kuugu waxyoonnay quraan carabi ah saad ugu digtid ree Makaad iyo waxa hareeraheeda ah (dadka kale) ugana digtid maalinta kulanka (qiyaamada) shaki male maalintaas, kooxi jannay gali kooxna jaxiimo.

وَلَوۡ شَآءَ ٱللَّهُ لَجَعَلَهُمۡ أُمَّةٗ وَٰحِدَةٗ وَلَٰكِن يُدۡخِلُ مَن يَشَآءُ فِي رَحۡمَتِهِۦۚ وَٱلظَّٰلِمُونَ مَا لَهُم مِّن وَلِيّٖ وَلَا نَصِيرٍ ٨

8. Hadduu doono Alle wuxuu ka yeeli lahaa dadka ummad kaliya, laakiin wuxuu galiyaa cidduu doono naxariistiisa, daalimiintuna ma helaan sokeeye iyo gargaare midna.

Siduu Alle ugu waxyooday Nabiyadii hore yuu ugu waxyooday Nabiga Muxamed ah (ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee), caa'isha waxay sheegtay inay aragtay Nabiga oo waxyi ku soo dagi maalin qaboow oo haddana dhidid ka daadan wajigiisa, tan kale qudro iyo awood Alle ayaa iska leh, samada iyo mallaa'igtuna way waynaysaa, quraankuna wuxuu u digi caalamka oo dhan, si uu wanaagga ugu hoggaamiyo, hadduu doono isagaa midayn kara Alle. **[Ash-Shuuraa: 1-8].**

أَمِ ٱتَّخَذُواْ مِن دُونِهِۦٓ أَوۡلِيَآءَۖ فَٱللَّهُ هُوَ ٱلۡوَلِيُّ وَهُوَ يُحۡيِ ٱلۡمَوۡتَىٰ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَيۡءٖ قَدِيرٞ ٩

9. Mise waxay yeesheen gaaladii Alle ka sokow awliyo (ay caabudaan) Alle umbaa wali ah, isagaana nooleeya wixii dhintay, isagaana wax walba kara.

وَمَا ٱخۡتَلَفۡتُمۡ فِيهِ مِن شَيۡءٖ فَحُكۡمُهُۥٓ إِلَى ٱللَّهِۚ ذَٰلِكُمُ ٱللَّهُ رَبِّي عَلَيۡهِ تَوَكَّلۡتُ وَإِلَيۡهِ أُنِيبُ ١٠

10. Waxaad isku khilaaftaan oo shay ah Alle ayaa leh xukunkiisa (loo celin), kaasina waa Allaha i barbaariya, isagaana tala saartaa, xaggiisaana u noqon.

فَاطِرُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۚ جَعَلَ لَكُم مِّنۡ أَنفُسِكُمۡ أَزۡوَٰجٗا وَمِنَ ٱلۡأَنۡعَٰمِ أَزۡوَٰجٗا يَذۡرَؤُكُمۡ فِيهِۚ لَيۡسَ كَمِثۡلِهِۦ شَيۡءٞۖ وَهُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلۡبَصِيرُ ١١

11. Isagaa abuuray samooyinka iyo dhulka, idiinkana yeelay naftiinna noocyo (lab iyo dhaddig) xoolahana idiinka yeelay noocyo, wuuna idinku abuuraa idinkuna badiyaa ahaysiintaa sababteed, wax la mid ahna ma jiro, waana maqle arka.

لَهُۥ مَقَالِيدُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۖ يَبۡسُطُ ٱلرِّزۡقَ لِمَن يَشَآءُ وَيَقۡدِرُۚ إِنَّهُۥ بِكُلِّ شَيۡءٍ عَلِيمٞ ١٢

12. Isagaa iska leh xukunka samooyinka iyo dulka, wuuna u fidiyaa rizqiga ruuxuu doono, wuxuuna ku cidhiidhyaa cidduu doono, wax walbana waa ogyahay.

* شَرَعَ لَكُم مِّنَ ٱلدِّينِ مَا وَصَّىٰ بِهِۦ نُوحٗا وَٱلَّذِيٓ أَوۡحَيۡنَآ إِلَيۡكَ وَمَا وَصَّيۡنَا بِهِۦٓ إِبۡرَٰهِيمَ وَمُوسَىٰ وَعِيسَىٰٓۖ أَنۡ أَقِيمُواْ ٱلدِّينَ وَلَا تَتَفَرَّقُواْ فِيهِۚ كَبُرَ عَلَى ٱلۡمُشۡرِكِينَ مَا تَدۡعُوهُمۡ إِلَيۡهِۚ ٱللَّهُ يَجۡتَبِيٓ إِلَيۡهِ مَن يَشَآءُ وَيَهۡدِيٓ إِلَيۡهِ مَن يُنِيبُ ١٣

13. Wuxuuna idiin jideeyey xagga diinta wuxuu u dardaarmay (Nabi) Nuux iyo kaan kuu waxyoonnay adiga iyo waxaan u dardaarannay (Nabi) Ibraahiim (Nabi) Muuse iyo (Nabi) Ciise inay oogaan diinta, aydaan kuna kala tagin dhexdiisa, waxaa ku waynaaday gaalada waxaad ugu yeedhi, Alle ayaa u doorta xaggiisa cidduu doono una hanuuniya xaggiisa cidduu hanuunin.

وَمَا تَفَرَّقُوٓاْ إِلَّا مِنۢ بَعۡدِ مَا جَآءَهُمُ ٱلۡعِلۡمُ بَغۡيَۢا بَيۡنَهُمۡۚ وَلَوۡلَا كَلِمَةٞ سَبَقَتۡ مِن رَّبِّكَ إِلَىٰٓ أَجَلٖ مُّسَمّٗى لَّقُضِيَ بَيۡنَهُمۡۚ وَإِنَّ ٱلَّذِينَ أُورِثُواْ ٱلۡكِتَٰبَ مِنۢ بَعۡدِهِمۡ لَفِي شَكّٖ مِّنۡهُ مُرِيبٖ ١٤

14. Mana kala tagin markuu u yimi cilmigu ka dib mooyee, dulmi iyo xasad dartiis, haddayna jirin kalimo Allehaa ka hormartay oo tan iyo muddo magacaaban (in la sugo) waxaa la kala xukmin lahaa dhexdooda, kuwii gadaashood la dhaxalsiiyey kitaabka waxay ku sugan yihiin shaki daran.

Allaa wali u ah mu'miniinta, wax walbana kara, wixii laysku khilaafana loo celin, lana tala saartaa, loona noqdaa, samadana abuuray, noocyana idinka abuuray, wax la midana jirin, xukunka samada iyo dhulkana iska leh, rizqigana waasiciya ama cidhiidhya, inoona jideeyey diin xaq ah oo ah tii Nabiyadii hore la faray oo kale, oo ah in diinta si fiican loogu dhaqmo oon lagu kala tagin, gaalase way diidday xaqii xasad dartiis, wayna kala tageen, Alle umbaase awood leh. **[Ash-Shuuraa: 9-14].**

فَلِذَٰلِكَ فَٱدۡعُۖ وَٱسۡتَقِمۡ كَمَآ أُمِرۡتَۖ وَلَا تَتَّبِعۡ أَهۡوَآءَهُمۡۖ وَقُلۡ ءَامَنتُ بِمَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ مِن كِتَٰبٖۖ وَأُمِرۡتُ لِأَعۡدِلَ بَيۡنَكُمُۖ ٱللَّهُ رَبُّنَا وَرَبُّكُمۡۖ لَنَآ أَعۡمَٰلُنَا وَلَكُمۡ أَعۡمَٰلُكُمۡۖ لَا حُجَّةَ بَيۡنَنَا وَبَيۡنَكُمُۖ ٱللَّهُ يَجۡمَعُ بَيۡنَنَاۖ وَإِلَيۡهِ ٱلۡمَصِيرُ ١٥

15. Diinkaas (aan nebiyadi hore u dardaarannay) ugu yeedh dadka, u toosnawna sidii lagu faray, hana raacin hawadooda, waxaadna dhahdaa waxaan rumeeyey waxa Alle soo dajiyey oo kitaab ah, waxaana lay faray inaan u caddaalo falo dhexdiinna, Alle na waa Rabbiganno iyo Rabbigiin, waxaa noo sugnaaday waxaan camal fallo, idinkana waxaa idiin sugnaaday waxaad camal fashaan, doodina inama dhextaallo (xaqu wuu caddaaday ee waad madax adaygaysaan), Alle ayaa kulmin dhexdeenna, xaggiisaana loo ahaan.

وَٱلَّذِينَ يُحَآجُّونَ فِي ٱللَّهِ مِنۢ بَعۡدِ مَا ٱسۡتُجِيبَ لَهُۥ حُجَّتُهُمۡ دَاحِضَةٌ عِندَ رَبِّهِمۡ وَعَلَيۡهِمۡ غَضَبٞ وَلَهُمۡ عَذَابٞ شَدِيدٞ ١٦

16. Kuwa ku doodaya Alle inta la ajiibay kadib xujadoodu waa baadil Alle agtiisa, korkoodana cadhaa ah, waxaana u sugnaaday cadaab daran.

ٱللَّهُ ٱلَّذِيٓ أَنزَلَ ٱلۡكِتَٰبَ بِٱلۡحَقِّ وَٱلۡمِيزَانَۗ وَمَا يُدۡرِيكَ لَعَلَّ ٱلسَّاعَةَ قَرِيبٞ ١٧

17. Alle waa kan u dajiyey kitaabka si xaq ah iyo miisaan, (caddaalada), mana ogid waxay mudan tahay in saacadda (qiyaame) dhawdahay.

يَسْتَعْجِلُ بِهَا ٱلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِهَا ۖ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ مُشْفِقُونَ مِنْهَا وَيَعْلَمُونَ أَنَّهَا ٱلْحَقُّ ۗ أَلَآ إِنَّ ٱلَّذِينَ يُمَارُونَ فِى ٱلسَّاعَةِ لَفِى ضَلَٰلٍۭ بَعِيدٍ ﴿١٨﴾

18. Waxaa dadajista saacadda kuwaan rumeynin iyada, kuwa rumeeyayna way ka cabsadaan xaggeeda, waxayna ogyihiin inay xaq tahay, kuwa ku murmi saacaddana waxay ku sugan yihiin baadi cad.

Aayadda hore waxay kulmisatay toban eray oo mid walba kan kale ka gaar yahay oo wada amar iyo reebid iyo toosin ah, waxaana la mid ah aayatulkursi, waxaana ka mid ah waxyaalaha u waaweyn: Alle oo dadka loogu yeedho, in la toosnaado, inaan hawada gaalada la raacin, in dadka caddaalad lagu maamulo, in la ogaado in Alle ilaah keli ah ee in cibaado mudan u yahay dadkoo dhan, inaan wax qarsoon jirin diinta islaamka ah. In cid walba camalkeeda mas'uul ka tahay, in Alle loo noqon. Bal day weynanka aayadda, tan kale Alle oo lagu doodo inta xaqu caddaaday waa wax kama jiraan iyo ciqaab Alle, illeen Alle ayaa soo dajiyey quraan iyo caddaaladda, qiyaamadu goortay dhicina oge, waana doqonnimo iyo baadinnimo in la soo dedejisto, waxaase habboon in laga cabsado loona darbado sida mu'miniinta, shakigeeduna waa baadi fog. **[Ash-Shuuraa: 15-18].**

ٱللَّهُ لَطِيفٌۢ بِعِبَادِهِۦ يَرْزُقُ مَن يَشَآءُ ۖ وَهُوَ ٱلْقَوِىُّ ٱلْعَزِيزُ ﴿١٩﴾

19. Alle waa u naxariis badanaha addoommadiisa wuxuuna arzuqaa cidduu doono, waana xoogbadane adkaade ah.

مَن كَانَ يُرِيدُ حَرْثَ ٱلْءَاخِرَةِ نَزِدْ لَهُۥ فِى حَرْثِهِۦ ۖ وَمَن كَانَ يُرِيدُ حَرْثَ ٱلدُّنْيَا نُؤْتِهِۦ مِنْهَا وَمَا لَهُۥ فِى ٱلْءَاخِرَةِ مِن نَّصِيبٍ ﴿٢٠﴾

20. Ruuxii dooni camalka aakhiro waan u siyaadinnaa camalkiisa, ruuxiise ah mid dooni camal adduunyo waan ka siinnaa xaggeeda, kumana leh aakhiro wax nasiib ah.

أَمْ لَهُمْ شُرَكَٰٓؤُا۟ شَرَعُوا۟ لَهُم مِّنَ ٱلدِّينِ مَا لَمْ يَأْذَنۢ بِهِ ٱللَّهُ ۚ وَلَوْلَا كَلِمَةُ ٱلْفَصْلِ لَقُضِىَ بَيْنَهُمْ ۗ وَإِنَّ ٱلظَّٰلِمِينَ لَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٢١﴾

21. Mise waxay leeyihiin gaaladu shurako Alle oo u jideeyey diin iyo (xukun) aan Alle idmin haddayna jirin kalimadda kala bixinta (qiyaamada) waa la kala xukumi lahaa dhexdooda, daalimiintana waxaa u sugnaaday cadaab daran.

22. Waxaad arkeysaa daalimiinta oo ka cabsan waxay kasbadeen, wuuna ku dhici korkooda, kuwa rumeeyey xaqase oo camal fiican falay waxay gali beero janno, waxayna ku leeyihiin waxay doonaan Alle agtiisa, taasina waa fadli weyn.

تَرَى ٱلظَّٰلِمِينَ مُشْفِقِينَ مِمَّا كَسَبُوا۟
وَهُوَ وَاقِعٌۢ بِهِمْ ۗ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟
ٱلصَّٰلِحَٰتِ فِى رَوْضَاتِ ٱلْجَنَّٰتِ ۖ
لَهُم مَّا يَشَآءُونَ عِندَ رَبِّهِمْ ۚ ذَٰلِكَ هُوَ
ٱلْفَضْلُ ٱلْكَبِيرُ ﴿٢٢﴾

Xadiith waxaa ah: ugu bishaaree ummaddaan sharaf, sarreyn iyo gargaar iyo dhulkoo la makaniyo, ruuxii camal aakhiro u fala adduunyo darteed aakhiro kuma laha nasiib. Axmed iyo Ibnu Xibbaan. Alle na waa naxariiste, cid walbana waxay mudan waxay camal fashay, waxaan diin ahayn oon Alle idminna ciddii diin iyo sharci ka dhigata iyo tan ku raacdaba waa cid halaagsantay oo daalim ah, cadaabna u sugnaaday, qiyaamadana ka cabsan waxay faleen iyo waxa ku dhici, mu'miniintuna waxay gali beer janne, waxayna ka heli Alle agtiisa waxay doonaan, waana fadli weyn. **[Ash-Shuuraa: 19-22].**

23. Kaasi waa midka uu ugu bishaareyn Alle addoomihiisa ah kuwa rumeeyey (xaqa), camal fiicanna falay, waxaadna dhahdaa: Nabiyoow maydin warsanaayo ujuuro xaqa gaadhsiintiisa oon ahayn jacayl qaraabannimo (aad igu dhawraysaan, Quraysh oo dhammi qaraaba ayay la ahaayeen), ruuxii kasbada wanaagna waxaannu u siyaadin wanaag, Alle na waa dambidhaafe mahdiyo.

ذَٰلِكَ ٱلَّذِى يُبَشِّرُ ٱللَّهُ عِبَادَهُ ٱلَّذِينَ
ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ ۗ قُل لَّآ
أَسْـَٔلُكُمْ عَلَيْهِ أَجْرًا إِلَّا ٱلْمَوَدَّةَ فِى
ٱلْقُرْبَىٰ ۗ وَمَن يَقْتَرِفْ حَسَنَةً نَّزِدْ لَهُۥ
فِيهَا حُسْنًا ۚ إِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ شَكُورٌ ﴿٢٣﴾

24. Mise waxay dhihi wuxuu ku been abuurtay Alle, hadduu doono Alle wuxuu dabooli lahaa qalbigaaga, wuxuuna tiraa Alle xumaanta, xaqana wuxuu ku sugaa kalimaddiisa (quraanka), Alle na waa ogyahay waxa laabta ku sugan.

أَمْ يَقُولُونَ ٱفْتَرَىٰ عَلَى ٱللَّهِ كَذِبًا ۖ فَإِن
يَشَإِ ٱللَّهُ يَخْتِمْ عَلَىٰ قَلْبِكَ ۗ وَيَمْحُ ٱللَّهُ
ٱلْبَٰطِلَ وَيُحِقُّ ٱلْحَقَّ بِكَلِمَٰتِهِۦٓ ۚ إِنَّهُۥ
عَلِيمٌۢ بِذَاتِ ٱلصُّدُورِ ﴿٢٤﴾

25. Alle na waa kan aqbala toobada addoommadiisa, kana dhaafa xumaanta ogna waxaad falaysaan.

وَهُوَ ٱلَّذِى يَقْبَلُ ٱلتَّوْبَةَ عَنْ عِبَادِهِۦ وَيَعْفُواْ عَنِ ٱلسَّيِّـَٔاتِ وَيَعْلَمُ مَا تَفْعَلُونَ ﴿٢٥﴾

26. Allana wuxuu ajiibaa kuwa rumeeyey xaqa oo camal fiican falay wuxuuna u siyaadiyaa fadligiisa, gaalana waxaa u sugnaaday cadaab daran.

وَيَسْتَجِيبُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ وَيَزِيدُهُم مِّن فَضْلِهِۦ ۚ وَٱلْكَٰفِرُونَ لَهُمْ عَذَابٌ شَدِيدٌ ﴿٢٦﴾

Alle wax badan buu u bishaareeyey addoommadiisa suubban. Diinta iyo xaqa gaadhsiintiisuna ma aha wax ujuuro lagu xidho, ciddii wanaag fashana Alle waa u siyaadiyaa, quraankuna waa xaq Alle ka soo dagay, mana aha wax Nabigu iskala yimid siday gaaladu sheegeen, Alle na waa toobad aqbale. Xumaan astura ah, oo ajiiba maqlana mu'miniinta. Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Alle waa uga farax badan yahay toobadda addoonkiisa ruux gaadiidki uu sahayda ku watay meel cidla ah kaga luntay, markaas seexday markuu ka quustay, kadibna arkay gaadiidkiisii oo ag taagan oo markaas qabtay faruur xidhkeedii. Waxaa wariyey Muslim. **[Ash-Shuuraa: 23-26].**

27. Hadduu Alle u fidiyo (waasiciyo) rizqiga addoommadiisa waxay ku kibri lahaayeen dhulka wuxuuse u soo dajin qadarkuu doono, Alle na addoommadiisa wuu ogyahay oo arkaa.

* وَلَوْ بَسَطَ ٱللَّهُ ٱلرِّزْقَ لِعِبَادِهِۦ لَبَغَوْاْ فِى ٱلْأَرْضِ وَلَٰكِن يُنَزِّلُ بِقَدَرٍ مَّا يَشَآءُ ۚ إِنَّهُۥ بِعِبَادِهِۦ خَبِيرٌۢ بَصِيرٌ ﴿٢٧﴾

28. Alle na waa kan soo dajiya roobka intay quustaan kadib fidiyana naxariistiisa, waana Allaha waliga ah (gargaare) ee la mahdiyo.

وَهُوَ ٱلَّذِى يُنَزِّلُ ٱلْغَيْثَ مِنۢ بَعْدِ مَا قَنَطُواْ وَيَنشُرُ رَحْمَتَهُۥ ۚ وَهُوَ ٱلْوَلِىُّ ٱلْحَمِيدُ ﴿٢٨﴾

29. Calaamooyinkiisa waxaa ka mid ah abuuridda samooyinka iyo dhulka iyo wuxuu ku fidiyay (ku abuuray) dhexdooda oo socda, Alle na inuu soo kulmiyo

وَمِنْ ءَايَٰتِهِۦ خَلْقُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَمَا بَثَّ فِيهِمَا مِن دَآبَّةٍ ۚ وَهُوَ عَلَىٰ جَمْعِهِمْ إِذَا يَشَآءُ قَدِيرٌ ﴿٢٩﴾

dhammaantood markuu doono wuu karaa.

30. Wixii idinku dhaca oo musiiba ah (dhib ah) waa waxay kasbadeen gacmihiinnu, wuxuuna idinka cafiyaa (Alle) wax badan.

وَمَآ أَصَٰبَكُم مِّن مُّصِيبَةٍ فَبِمَا كَسَبَتْ أَيْدِيكُمْ وَيَعْفُواْ عَن كَثِيرٍ ﴿٣٠﴾

31. Mana tihidin kuwo Alle ku daaliya dhulka dhexdiisa, idiimana sugnaanin isaga ka sokoow wali iyo gargaare midna.

وَمَآ أَنتُم بِمُعْجِزِينَ فِى ٱلْأَرْضِ ۖ وَمَا لَكُم مِّن دُونِ ٱللَّهِ مِن وَلِىٍّ وَلَا نَصِيرٍ ﴿٣١﴾

Dadka dabeecadiisa waxaa ka mid ah in markuu ladanyahay uu kibro islana waynaado marka laga reebo kuwa wanaagsan ee dhab u rumeeyey xaqa. Qataadana wuxuu yidhi: waxaa la dhihi jiray nolol waxaa u fiican taan kuna shuqlinin kuna kibrinin. Hasa ahaatee xigmadda Alle waxay keentay in cid walba loo arzuqo sida Alle doono illeen isagaa wax walba oge, addoomadiisana yaqaanee. Roobkana Alle ayaa keena quusasho kadib, cirka, dhulka iyo waxa ku dhex noolla Alle ayaa abuuray, karana inuu soo kulmiyo qiyaamada markuu doono, wixii dhib ah oo dadka ku dhacana waa waxay isu sababeen ooy kasbadeen, wax badanna Alle ayaaba ka cafiya, waxdaaliya ama cajis galiyana ma jiro gargaare aan isaga ahayna ma jiro. Daxaak wuxuu yidhi: ma ogin ruux xifdiyey quraanka oo halmaamay dambi mooyee, wuxuuna yidhi: masiibadee ka wayn halmaanka quraanka. **[Ash-Shuuraa: 27-31].**

32. Calaamooyinka Alle waxaa ka mid ah maraakiibta (socota) badda iyadood mooddo buuro.

وَمِنْ ءَايَٰتِهِ ٱلْجَوَارِ فِى ٱلْبَحْرِ كَٱلْأَعْلَٰمِ ﴿٣٢﴾

33. Hadduu doono (Alle) wuxuu xasiliyaa (joojiyaa) dabaysha markaasay fadhiistaan biyaha korkooda, taasina waxaa ugu sugan calaamo ruux kastoo samir iyo mahad badan.

إِن يَشَأْ يُسْكِنِ ٱلرِّيحَ فَيَظْلَلْنَ رَوَاكِدَ عَلَىٰ ظَهْرِهِۦٓ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَٰتٍ لِّكُلِّ صَبَّارٍ شَكُورٍ ﴿٣٣﴾

34. Hadduu doonana (Alle) wuu halaagaa doomaha waxay kasbadeen darteed, wax badanna wuu ka cafiyaa.

أَوْ يُوبِقْهُنَّ بِمَا كَسَبُواْ وَيَعْفُ عَن كَثِيرٍ ﴿٣٤﴾

35. Waxayna ogaan kuwa ku murmi aayaadkannaga inuusan u sugnaannin meeley magan galaan.

وَيَعْلَمَ ٱلَّذِينَ يُجَٰدِلُونَ فِىٓ ءَايَٰتِنَا مَا لَهُم مِّن مَّحِيصٍ ﴿٣٥﴾

36. Wixii laydin siiyo oo wax ah waa uun nolasha dhaw raaxadeeda, waxa Alle agtiisa ah yaase u khayr badan una hadhid badan kuwa rumeeyey (xaqa) Allehoodna tala saarta.

فَمَآ أُوتِيتُم مِّن شَىْءٍ فَمَتَٰعُ ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا ۖ وَمَا عِندَ ٱللَّهِ خَيْرٌ وَأَبْقَىٰ لِلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَلَىٰ رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ ﴿٣٦﴾

Jiridda Alle iyo awooddiisa wuxuu shakin ma aha ruux caqli iyo maskax leh, bal day maraakiibta iyo doomaha iyo say u socdaan mawjada badda si loogu nacfiyo, hadduu doonana Alle wuu maansheeyaa oo halaagaa ama dhaqaaqa u diidaa xumaantooda darteed, illeen wuu ogyahay wax walbee, kamana qarsoona kuwa ugu murma aayaadkiisa madax adayg wax gargaare ahna ma helaan markuu ciqaabo, adduunyaduna wax loo leexdo oo loo go'o ma aha illeen waxa Alle agtiisa ah oo wanaag ah iyo tala saarashadiisa yaa u khayr badan kuwa xaqa rumeeyey. **[Ash-Shuuraa: 32-36].**

37. Kuwaasi waa kuwa ka fogaada dambiga waaweyn iyo xumaanta, markey cadhoodaanna u cafiya (u dhaafa kuwa dhibka u gaystay).

وَٱلَّذِينَ يَجْتَنِبُونَ كَبَٰٓئِرَ ٱلْإِثْمِ وَٱلْفَوَٰحِشَ وَإِذَا مَا غَضِبُوا۟ هُمْ يَغْفِرُونَ ﴿٣٧﴾

38. Waana kuwa ajiibay (maqlay) Rabbigood oogayna salaadda amarkooduna tashi yahay dhexdooda waxaan ku arzaaqnayna wax ka bixiya.

وَٱلَّذِينَ ٱسْتَجَابُوا۟ لِرَبِّهِمْ وَأَقَامُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ وَأَمْرُهُمْ شُورَىٰ بَيْنَهُمْ وَمِمَّا رَزَقْنَٰهُمْ يُنفِقُونَ ﴿٣٨﴾

39. Waana kuwa marka gardarro (iyo dulmi) ku dhaco gargaarta (iska celiya).

وَٱلَّذِينَ إِذَآ أَصَابَهُمُ ٱلْبَغْىُ هُمْ يَنتَصِرُونَ ﴿٣٩﴾

40. Xumaan abaalkeeduna waa ku abaal marin mid la mid ah, ruuxiise iska cafiya oo wanaajiya ajrigiisa Alle ayaa siin, Alle na ma jecla daalimiinta.

وَجَزَٰٓؤُا۟ سَيِّئَةٍ سَيِّئَةٌ مِّثْلُهَا ۖ فَمَنْ عَفَا وَأَصْلَحَ فَأَجْرُهُۥ عَلَى ٱللَّهِ ۚ إِنَّهُۥ لَا يُحِبُّ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٤٠﴾

41. Ruuxii gargaarta inta la dulmiyey ka dib kuwaas korkooda wax ma saarro (jid laguma leh).

وَلَمَنِ ٱنتَصَرَ بَعۡدَ ظُلۡمِهِۦ فَأُوْلَٰٓئِكَ مَا عَلَيۡهِم مِّن سَبِيلٍ ﴿٤١﴾

42. Waxaase dhib saaran yahay uun (jid lagu leeyahay) kuwa dulmiya dadka kuna kibra dhulka xaq darro, kuwaas waxaa u sugnaaday cadaab daran.

إِنَّمَا ٱلسَّبِيلُ عَلَى ٱلَّذِينَ يَظۡلِمُونَ ٱلنَّاسَ وَيَبۡغُونَ فِي ٱلۡأَرۡضِ بِغَيۡرِ ٱلۡحَقِّۚ أُوْلَٰٓئِكَ لَهُمۡ عَذَابٌ أَلِيمٞ ﴿٤٢﴾

43. Ruuxii samra oo iska cafiya taasi waa arrin loo qasdo (la jecel yahay).

وَلَمَن صَبَرَ وَغَفَرَ إِنَّ ذَٰلِكَ لَمِنۡ عَزۡمِ ٱلۡأُمُورِ ﴿٤٣﴾

Xukunka muslimiintu waa wada tashi, iskaalmeyn iyo isjacayl, saasayna fari diinta islaamku, maxaa yeelay waxay dhab u rumeeyeen Alle iyo sharcigiisa, salaaddana way oogeen, wayna is taakuleeyaan, xumaantana way ka indho laabaan, dulmi iyo gardarro iyo isla weynina agtooda ma taallo, ciddiise dulmida oo ku xadgudubta way u jawaabaan, hadday cafiyaanna way fiican tahay, illeen ciddii dulmi badan unbaa qalloocan oo jid darane. Nabiguna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): labada is cayda waxay dhahaanba midka billaabay (yaa xumaanta leh) hadduusan xad gudbin kan la dulmiyey. Waxaa kaloo sugnaatay in Nabigu yidhi: saamaxaadda ruuxa wuxuu Alle ugu siyaadiyaa sharaf. **[Ash-Shuuraa: 37-43].**

44. Ruuxii Alle dhumiyo ma helo sokeeye gadaashiis, waxaadna arkeysaa daalimiintu markey arkaan cadaabka iyagoo leh ma suuroobi karaa waddo (hab) loogu noqdo adduunkii.

وَمَن يُضۡلِلِ ٱللَّهُ فَمَا لَهُۥ مِن وَلِيّٖ مِّنۢ بَعۡدِهِۦۗ وَتَرَى ٱلظَّٰلِمِينَ لَمَّا رَأَوُاْ ٱلۡعَذَابَ يَقُولُونَ هَلۡ إِلَىٰ مَرَدّٖ مِّن سَبِيلٖ ﴿٤٤﴾

45. Waxaadna arkeysaa iyagoo loo bandhigi naarta, oo la khushuucsan dulli, kana dayi wax si qarsoon, waxayna dhaheen kuwii rumeeyey (xaqa): kuwa khasaaray waa kuwa khasaariyey naftooda iyo ehelkooda maalinta

وَتَرَىٰهُمۡ يُعۡرَضُونَ عَلَيۡهَا خَٰشِعِينَ مِنَ ٱلذُّلِّ يَنظُرُونَ مِن طَرۡفٍ خَفِيّٖۗ وَقَالَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِنَّ ٱلۡخَٰسِرِينَ ٱلَّذِينَ خَسِرُوٓاْ أَنفُسَهُمۡ وَأَهۡلِيهِمۡ يَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِۗ أَلَآ إِنَّ ٱلظَّٰلِمِينَ فِي عَذَابٖ مُّقِيمٖ ﴿٤٥﴾

qiyaame, daalimiintuna waxay gali cadaab joogta ah.

وَمَا كَانَ لَهُم مِّنْ أَوْلِيَآءَ يَنصُرُونَهُم مِّن دُونِ ٱللَّهِ ۗ وَمَن يُضْلِلِ ٱللَّهُ فَمَا لَهُۥ مِن سَبِيلٍ ﴿٤٦﴾

46. Umana sugnaan awliyo (sokeeye) u gargaara Alle ka sokoow, ruux Alle qaddaray dhumiddiisana jid uma sugnaannin (uu ku tooso).

ٱسْتَجِيبُوا۟ لِرَبِّكُم مِّن قَبْلِ أَن يَأْتِىَ يَوْمٌ لَّا مَرَدَّ لَهُۥ مِنَ ٱللَّهِ ۚ مَا لَكُم مِّن مَّلْجَإٍ يَوْمَئِذٍ وَمَا لَكُم مِّن نَّكِيرٍ ﴿٤٧﴾

47. Ajiiba (maqla) Allihiin ka hor intaanu Alle xaggii ka iman maalin aan la celin karin, idiinmana sugnaanayo wax la magan galo, maalintaas, idiinmana sugna inkiraad (danbigoodii).

فَإِنْ أَعْرَضُوا۟ فَمَآ أَرْسَلْنَٰكَ عَلَيْهِمْ حَفِيظًا ۖ إِنْ عَلَيْكَ إِلَّا ٱلْبَلَٰغُ ۗ وَإِنَّآ إِذَآ أَذَقْنَا ٱلْإِنسَٰنَ مِنَّا رَحْمَةً فَرِحَ بِهَا ۖ وَإِن تُصِبْهُمْ سَيِّئَةٌۢ بِمَا قَدَّمَتْ أَيْدِيهِمْ فَإِنَّ ٱلْإِنسَٰنَ كَفُورٌ ﴿٤٨﴾

48. Hadday jeedsadaan kuuma aannaan dirin inaad ilaaliso korkooda, korkaaga ma aha waxaan gaadhsiin ahayn, markaan dhadhansiinno dadkana naxariis way farxaan «si kibir ah», hadday ku dhacdo xumaan waxay gacmahoodu hor marsadeen darteed dadkii aad buu u gaaloobaa.

Awoodda Alle ayaa leh ciddii hanuun ka doontana wuu toosiyaa, kii dhumana wuu halaagi, daalimiintuna waxay la kulmi qiyaamada dulli iyo cadaab daran, iyo khaasare dhab ah, gargaarana ma helaan Alle ka soo hadhay, waase in Alle la maqlo qiyaame ka hor, illeen wax celin iyo gargaare midna ma jiree, Nabiga waxaa uun saaran gaadhsiin, mase aha ilaaliye iyo qasbe, had iyo jeerna khayr iyo sharba waa in Alle la aqoonsado, loona hoggaansamo. **[Ash-Shuuraa: 44-48].**

لِّلَّهِ مُلْكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ يَخْلُقُ مَا يَشَآءُ ۚ يَهَبُ لِمَن يَشَآءُ إِنَٰثًا وَيَهَبُ لِمَن يَشَآءُ ٱلذُّكُورَ ﴿٤٩﴾

49. Alle ayaa iska leh xukunka samooyinka iyo dhulka, wuxuuna abuuraa wuxuu doono, wuxuu siiyaa cidduu doono gabdho, cidna wuxuu siiyaa wiilal.

أَوۡ يُزَوِّجُهُمۡ ذُكۡرَانٗا وَإِنَٰثٗاۖ وَيَجۡعَلُ مَن يَشَآءُ عَقِيمًاۚ إِنَّهُۥ عَلِيمٞ قَدِيرٞ ٥٠

50. Ama wuu isku lammaaneeyaa wiilal iyo gabdho, ruuxuu doonana wuxuu ka yeelaa madhale, Alle ayaana wax og, karana.

۞ وَمَا كَانَ لِبَشَرٍ أَن يُكَلِّمَهُ ٱللَّهُ إِلَّا وَحۡيًا أَوۡ مِن وَرَآيِٕ حِجَابٍ أَوۡ يُرۡسِلَ رَسُولٗا فَيُوحِيَ بِإِذۡنِهِۦ مَا يَشَآءُۚ إِنَّهُۥ عَلِيٌّ حَكِيمٞ ٥١

51. Uma suurawdo dad inuu Alle la hadlo waxyi mooyee, ama kala hadlo xijaab gadaashiis, ama uu u soo diro farriin (malag), oo markaas ugu waxyooda idamka Alle wuxuu doono, Alle na waa sarreeye falsan.

وَكَذَٰلِكَ أَوۡحَيۡنَآ إِلَيۡكَ رُوحٗا مِّنۡ أَمۡرِنَاۚ مَا كُنتَ تَدۡرِي مَا ٱلۡكِتَٰبُ وَلَا ٱلۡإِيمَٰنُ وَلَٰكِن جَعَلۡنَٰهُ نُورٗا نَّهۡدِي بِهِۦ مَن نَّشَآءُ مِنۡ عِبَادِنَاۚ وَإِنَّكَ لَتَهۡدِيٓ إِلَىٰ صِرَٰطٖ مُّسۡتَقِيمٖ ٥٢

52. Saasaannu kuugu waxyoonnay nolol amarkannaga ah (quraanka), maadan aqoonnin kitaab wuxuu yahay iyo iimaan midna, laakiin waxaan ka yeellay nuur aannu ku hanuuninno ciddaan doonno oo addoommadannada ka mid ah, adiguna Nabiyoow waxaad ku hanuunin jidka toosan.

صِرَٰطِ ٱللَّهِ ٱلَّذِي لَهُۥ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلۡأَرۡضِۗ أَلَآ إِلَى ٱللَّهِ تَصِيرُ ٱلۡأُمُورُ ٥٣

53. Jidka Allaha iska leh xukunka waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan, xagga Alle ayayna u ahaan umuuruhu.

Awoodda cirka iyo dhulka Alle ayaa iska leh, sida aayado badan sheegeen, wuxuu rabo yuuna abuuraa, labada ruux ee isqabtana hadduu doono gabdhuu ka beeraa ama wiilal, ama labadaba, hadduu doonana madhalayaal buu ka dhigaa, taasina waxay muujin inayan labada isqabta midna masuul ka ahayn gabadh ahaanshaha ilmaha ama wiil noqoshadiisa. Alle na wax walba waa ogyahay waana karaa, isagaana og maslaxada iyo ilmaha uu rabo inuu adduunka u soo bixiyo, Nabiyadiina isagaa u waxyooday siduu Nabiga Muxamed ah (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) ugu waxyooday nolal uusan aqoonnin hadda ka hor, Alle ayaase ku hanuuniya addoommadiisa jidka toosan cidduu doono, illeen isagaa wax walba hantiya xaggiisana loo celin umuuraha. **[Ash-Shuuraa: 49-53].**

Suurat Az-Zukhruf

سُورَةُ الزُّخْرُفِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Mucjisada quraankay ku tusin.

حمٓ ﴿١﴾

2. Waxaan ku dhaartay kitaabka (quraanka) cade (muuqda) ee.

وَٱلْكِتَٰبِ ٱلْمُبِينِ ﴿٢﴾

3. Annagaa ka yeelley quraan carabi ku soo dagay, inaad kastaan darteed.

إِنَّا جَعَلْنَٰهُ قُرْءَٰنًا عَرَبِيًّا لَّعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ ﴿٣﴾

4. Wuxuuna ku sugan yahay kitaabka asalkiisa (looxul maxfuudka) annaga agteenna, waana sarreeyaa quraanku xigmadina ku dhan tahay.

وَإِنَّهُۥ فِىٓ أُمِّ ٱلْكِتَٰبِ لَدَيْنَا لَعَلِىٌّ حَكِيمٌ ﴿٤﴾

5. Ma waxaan quraanka idiinka haysanaynaa (daysanaynaa) inaad tihiin qoom ku xadgudbay xumaanta.

أَفَنَضْرِبُ عَنكُمُ ٱلذِّكْرَ صَفْحًا أَن كُنتُمْ قَوْمًا مُّسْرِفِينَ ﴿٥﴾

6. Badanaa intaan u dirray Nabi kuwii hore.

وَكَمْ أَرْسَلْنَا مِن نَّبِىٍّ فِى ٱلْأَوَّلِينَ ﴿٦﴾

7. Nabi uma imaaneyn gaaladii haddii kale way ku jees jeesi jireen.

وَمَا يَأْتِيهِم مِّن نَّبِىٍّ إِلَّا كَانُوا۟ بِهِۦ يَسْتَهْزِءُونَ ﴿٧﴾

8. Waxaanna halaagnay kuwo ka xoog badan qabasho waxaana tagay (hor maray) tusaalihii kuwii horreeyey (ee halaagga ahaa).

فَأَهْلَكْنَآ أَشَدَّ مِنْهُم بَطْشًا وَمَضَىٰ مَثَلُ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿٨﴾

Quraanka Alle ayaa soo dajiyey isagoo carabi ah, sharafna leh looxul-maxfuudkana ku qoran, Alle na uma daayo waxyiga iyo xaqa beenin darteed, maxaa yeelay ummadihii horaba wax badan baa loo diray Nabiyo u diga ayna ku jees jeesi jireen, Alle na wax badan oo ka mid ah yuu halaagay kuwaasoo ka xoog badnaa gaaladii ree Makaad. Qataade wuxuu yidhi: Alle Ayaan ku dhaartee haddii la koryeelo quraankan markey diideen kuwii horreeyey ee umaddan way halaagsami lahaayeen, hase yeeshee Alle sarreeye wuu ku celceliyey wuuna u naxariistay, wuxuuna ugu yeedhay ilaa labaatan sano iyo intii Alle doono. **[Az-Zukhruf: 1-8].**

وَلَئِن سَأَلْتَهُم مَّنْ خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ لَيَقُولُنَّ خَلَقَهُنَّ ٱلْعَزِيزُ ٱلْعَلِيمُ ﴿٩﴾

9. Haddaad warsato gaalada yaa abuuray samooyinka iyo dhulka waxay odhan waxaa abuuray Allaha adkaada ee wax walba og.

ٱلَّذِى جَعَلَ لَكُمُ ٱلْأَرْضَ مَهْدًا وَجَعَلَ لَكُمْ فِيهَا سُبُلًا لَّعَلَّكُمْ تَهْتَدُونَ ﴿١٠﴾

10. Waana Allaha idiin ka yeeley dhulka gogol, idiinkana yeeley dhexdiisa waddooyin si aad ugu hanuuntaan (toostaan).

وَٱلَّذِى نَزَّلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءًۢ بِقَدَرٍ فَأَنشَرْنَا بِهِۦ بَلْدَةً مَّيْتًا ۚ كَذَٰلِكَ تُخْرَجُونَ ﴿١١﴾

11. Waana Allaha ka soo dajiyey samada biyo qadaran oon ku noolayno magaalo dhimatay, saasaana leydiin soo bixin.

وَٱلَّذِى خَلَقَ ٱلْأَزْوَٰجَ كُلَّهَا وَجَعَلَ لَكُم مِّنَ ٱلْفُلْكِ وَٱلْأَنْعَٰمِ مَا تَرْكَبُونَ ﴿١٢﴾

12. Waana Allaha abuuray noocyada dhammaantood idiinkana yeeley maraakiibta iyo xoolaha waxaad kortaan.

لِتَسْتَوُۥا۟ عَلَىٰ ظُهُورِهِۦ ثُمَّ تَذْكُرُوا۟ نِعْمَةَ رَبِّكُمْ إِذَا ٱسْتَوَيْتُمْ عَلَيْهِ وَتَقُولُوا۟ سُبْحَٰنَ ٱلَّذِى سَخَّرَ لَنَا هَٰذَا وَمَا كُنَّا لَهُۥ مُقْرِنِينَ ﴿١٣﴾

13. Inaad ku ekaataan dhabarkeeda markaas aad xusuusataan nicmada Allihiin markaad ku ekaataan ood dhahdaan waxaa nasahan Allaha noo sahley tan mana nihin kuwo kara leyligeeda.

وَإِنَّآ إِلَىٰ رَبِّنَا لَمُنقَلِبُونَ ﴿١٤﴾

14. Annaguna xagga Rabbigeen yaannu u gaddoomeynaa.

Ciddii caqli leh oon dan gaara lahayn waxay qiri jiridda iyo awoodda Alle, illeen isagaa abuuray cirka, dhulka iyo wax kastaba. Gaaladii ree Makaadna saasay qirsanaayeen in kastooy caabudi jireen Alle wax ka soo hadhay, waxaase caabudid dhab ah mudan Allaha dhulka goglay, wadooyinkana ka bixiyay, cirkana biyo ka keenay, iyagoo qaddaran oo qiyaasan si loogu nooleeyo dhul abaaroobay iyo wax dhibaataysan. Waana Allaha sahlay maraakiibta iyo xoolaha si loogu nacfiyo loona mahdiyo Alle, illeen isagaa u leylyey dadkee. Nabiguna (ammaan iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) markuu koro gaadiid wuxuu ku mahdin jiray Allaha u jilciyey ee loo noqon xaggiisa. **[Az-Zukhruf: 9-14].**

15. Waxay uga yeeleen Alle addoommadiisa qayb, dadkuna waa gaaloow badane cad.

وَجَعَلُواْ لَهُۥ مِنْ عِبَادِهِۦ جُزْءًا ۚ إِنَّ ٱلْإِنسَٰنَ لَكَفُورٌ مُّبِينٌ ﴿١٥﴾

16. Miyuu ka yeeshay Alle wuxuu abuuray qaarkood gabdho, oo idiin doorey wiilal.

أَمِ ٱتَّخَذَ مِمَّا يَخْلُقُ بَنَاتٍ وَأَصْفَىٰكُم بِٱلْبَنِينَ ﴿١٦﴾

17. Marka loogu bishaareeyo midkood wuxuu Allaha Raxmaana uga yeelay mid shabbaha (mudnaanta in la caabudo), wuxuu noqdaa wajigiisu mid madow oo walbahaarsan.

وَإِذَا بُشِّرَ أَحَدُهُم بِمَا ضَرَبَ لِلرَّحْمَٰنِ مَثَلًا ظَلَّ وَجْهُهُۥ مُسْوَدًّا وَهُوَ كَظِيمٌ ﴿١٧﴾

18. Ma Alle ayay u yeeleen wax ku barbaara isqurxin, oon doodna caddayn karin.

أَوَمَن يُنَشَّؤُاْ فِى ٱلْحِلْيَةِ وَهُوَ فِى ٱلْخِصَامِ غَيْرُ مُبِينٍ ﴿١٨﴾

19. Waxay ka yeeleen malaa'igta ah addoommada Allaha Raxmaan ah dhadig, miyey joogeen abuurkoodii, waan qoreynaa maraggooda waana la warsan (waxaas).

وَجَعَلُواْ ٱلْمَلَٰٓئِكَةَ ٱلَّذِينَ هُمْ عِبَٰدُ ٱلرَّحْمَٰنِ إِنَٰثًا ۚ أَشَهِدُواْ خَلْقَهُمْ ۚ سَتُكْتَبُ شَهَٰدَتُهُمْ وَيُسْـَٔلُونَ ﴿١٩﴾

20. Waxay dhaheen hadduu doono Allaha Raxmaan ah maannaan caabudneen wax kale ugumana sugnaannin wax

وَقَالُواْ لَوْ شَآءَ ٱلرَّحْمَٰنُ مَا عَبَدْنَٰهُم ۗ مَّا لَهُم بِذَٰلِكَ مِنْ عِلْمٍ ۖ إِنْ هُمْ إِلَّا يَخْرُصُونَ ﴿٢٠﴾

cilmi ah arrintaas, waxaan beensheegayaal ahaynna ma aha.

Khalqiga dhammaantiis Alle ayaa leh, wax la wadaagana ma jiro, malaa'igtuna ma aha gabdho Alle iyo dhadig midna ee waa addoomo Alle oo wanaagsan, gaaladuna waxay sheegi waa uun been cad iyo xumaan, waxayna sameeyeen gafaf badan, sida inay Alle ilmo u sheegeen, inay malaa'igta gabdho Alle ku sheegeen, inay caabudaan waxaan xujo laheyn, inay sheegteen in Alle u qaddaray, iyo waxyaale kale oo jaahilnimo ah. **[Az-Zukhruf: 15-20].**

21. Mise waxaan siinnay kitaab ka horreyey (quraanka) oy haystaan isagaas.

أَمْ ءَاتَيْنَٰهُمْ كِتَٰبًا مِّن قَبْلِهِۦ فَهُم بِهِۦ مُسْتَمْسِكُونَ ﴿٢١﴾

22. Waxaybase dhaheen waxaan hellay aabbayowgannoo jid ku socda annaguna iyaga raadkoodii yaan ku hanuunsanahay.

بَلْ قَالُوٓا۟ إِنَّا وَجَدْنَآ ءَابَآءَنَا عَلَىٰٓ أُمَّةٍ وَإِنَّا عَلَىٰٓ ءَاثَٰرِهِم مُّهْتَدُونَ ﴿٢٢﴾

23. Waa saasoo kale umaannaan dirin magaalo hortaa u dige haddii kale waxay dhihi jireen kuwa raaxaystay annagu waxaan hellay aabbayoowgannoo jid ku sugan annaguna raadkooda yaan ku dayanaynaa.

وَكَذَٰلِكَ مَآ أَرْسَلْنَا مِن قَبْلِكَ فِى قَرْيَةٍ مِّن نَّذِيرٍ إِلَّا قَالَ مُتْرَفُوهَآ إِنَّا وَجَدْنَآ ءَابَآءَنَا عَلَىٰٓ أُمَّةٍ وَإِنَّا عَلَىٰٓ ءَاثَٰرِهِم مُّقْتَدُونَ ﴿٢٣﴾

24. Wuxuu yiri (kii u digaayay): (ma waxaad raacaysaan waxaas) xattaa haddaan idiinla imaado wax ka hanuunsan waxaad ka hesheen aabayaalkiin waxay dhihi annagu waxa laydin la soo diray waannu ka gaalownay.

۞ قَٰلَ أَوَلَوْ جِئْتُكُم بِأَهْدَىٰ مِمَّا وَجَدتُّمْ عَلَيْهِ ءَابَآءَكُمْ ۖ قَالُوٓا۟ إِنَّا بِمَآ أُرْسِلْتُم بِهِۦ كَٰفِرُونَ ﴿٢٤﴾

25. Markaasaan ka aarsannay, bal day siday noqotay cidhibtii beeniyayaasha (xaqa).

فَٱنتَقَمْنَا مِنْهُمْ ۖ فَٱنظُرْ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلْمُكَذِّبِينَ ﴿٢٥﴾

Gaaladu wax xujo ah iyo wax kitaab ah uma haystaan xaqa beenintiisa, ee waxaa jira inay aabbayaalkood oo wax ku sugnaa iyana ay ku raaceen. Waa caadada gaalada arrintaasu ayna iska dhaxlaan. Waa mid habboon inaad aabbahaa iyo ciddii fiicanba wanaagga ku raacdid, laakiin ma habboona in cidna xumaanta lagu raaco, ee waa in wanaagga uun la fiirsado lana raaco, haddii kale aargudashada Alle yaa daran, xaqa uun ku faan laakiin aabbe ha ku faanin. **[Az-Zukhruf: 21-25].**

وَإِذْ قَالَ إِبْرَٰهِيمُ لِأَبِيهِ وَقَوْمِهِۦٓ إِنَّنِى
بَرَآءٌ مِّمَّا تَعْبُدُونَ ﴿٢٦﴾

26. Xusa markuu ku yidhi (Nabi) Ibraahim aabihiis iyo qoomkiisii anigu waxaan bari ka ahay waxaad caabudaysaan.

إِلَّا ٱلَّذِى فَطَرَنِى فَإِنَّهُۥ سَيَهْدِينِ ﴿٢٧﴾

27. Waxaanse caabudi Allaha i abuuray isagaana i hanuunin.

وَجَعَلَهَا كَلِمَةًۢ بَاقِيَةً فِى عَقِبِهِۦ لَعَلَّهُمْ
يَرْجِعُونَ ﴿٢٨﴾

28. Wuxuuna ka yeelay kalimada (tawxiidka) tii ku baaqi ah faraca Ibraahiim si ay xaqa ugu noqdaan.

بَلْ مَتَّعْتُ هَٰٓؤُلَآءِ وَءَابَآءَهُمْ حَتَّىٰ
جَآءَهُمُ ٱلْحَقُّ وَرَسُولٌ مُّبِينٌ ﴿٢٩﴾

29. Saas ma aha ee waan u raaxeeyey kuwaas iyo aabbayaalkood intuu uga yimaado xaqu iyo Rasuul cad (oo muuqda).

وَلَمَّا جَآءَهُمُ ٱلْحَقُّ قَالُوا۟ هَٰذَا سِحْرٌ
وَإِنَّا بِهِۦ كَٰفِرُونَ ﴿٣٠﴾

30. Markuu u yimid xaqii waxay dhaheen kan waa sixir annaguna waannu ka gaalownay.

وَقَالُوا۟ لَوْلَا نُزِّلَ هَٰذَا ٱلْقُرْءَانُ عَلَىٰ رَجُلٍ
مِّنَ ٱلْقَرْيَتَيْنِ عَظِيمٍ ﴿٣١﴾

31. Waxay dhaheen gaaladii maxaa loogu dajin waayey quraankan nin deggan mid ka mid ah labada magaalo oo weyn.

أَهُمْ يَقْسِمُونَ رَحْمَتَ رَبِّكَ ۚ نَحْنُ قَسَمْنَا
بَيْنَهُم مَّعِيشَتَهُمْ فِى ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا ۚ
وَرَفَعْنَا بَعْضَهُمْ فَوْقَ بَعْضٍ دَرَجَٰتٍ
لِّيَتَّخِذَ بَعْضُهُم بَعْضًا سُخْرِيًّا ۗ وَرَحْمَتُ
رَبِّكَ خَيْرٌ مِّمَّا يَجْمَعُونَ ﴿٣٢﴾

32. Miyagaa qaybin naxariista Allehaa annagaa u qaybinna dhexdeeda rizqigooda nolosha adduunyo waana ka kor yeellay qaarkood qaarka kale darajooyin, si leysugu shaqeeyo, naxariista Allehaa yaa ka khayr badan waxay kulmin.

Gaal iyo mu'min xidhiidh kama dhaxeeyo, sidii Nabi Ibraahim iyo aabbihiis iyo qoomkiisii. Mana habboona in nicmada Alle lagu kibro, ama khayrkiisa la doono in lagu tasarrufo. Alle ayaa wax bixiya, rizqiga iyo wanaaggana qaybiya, cidduu rabana siiya. **[Az-Zukhruf: 26-32].**

وَلَوْلَآ أَن يَكُونَ ٱلنَّاسُ أُمَّةً وَٰحِدَةً لَّجَعَلْنَا لِمَن يَكْفُرُ بِٱلرَّحْمَٰنِ لِبُيُوتِهِمْ سُقُفًا مِّن فِضَّةٍ وَمَعَارِجَ عَلَيْهَا يَظْهَرُونَ ﴿٣٣﴾

33. Hadduusan dadku noqoneyn ummad kaliya (gaalnimada) waxaan uga yeeli lahayn kuwa ka gaalooba Alle guryahooda saanqaaf fidlo ah iyo sallaanno fidla ah, oy ku koraan.

وَلِبُيُوتِهِمْ أَبْوَٰبًا وَسُرُرًا عَلَيْهَا يَتَّكِـُٔونَ ﴿٣٤﴾

34. Guryahoodana waxaan uga yeeli lahayn albaabyo iyo sariiro ay ku dangiigsadaan oo fidla ah.

وَزُخْرُفًا ۚ وَإِن كُلُّ ذَٰلِكَ لَمَّا مَتَٰعُ ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا ۚ وَٱلْـَٔاخِرَةُ عِندَ رَبِّكَ لِلْمُتَّقِينَ ﴿٣٥﴾

35. Iyo dahab, waxaas dhamaantiisana waxaan raaxada nolasha dhaw ahayn ma aha, aakhiraase u ah Alle agtiisa kuwa dhawrsada.

وَمَن يَعْشُ عَن ذِكْرِ ٱلرَّحْمَٰنِ نُقَيِّضْ لَهُۥ شَيْطَٰنًا فَهُوَ لَهُۥ قَرِينٌ ﴿٣٦﴾

36. Ruuxii ka jeedsada «arag beela» xuska Allehaa Raxmaan ah (quraanka) waxaannu la xidhiidhinnaa shaydaan oo saaxiib u noqon.

وَإِنَّهُمْ لَيَصُدُّونَهُمْ عَنِ ٱلسَّبِيلِ وَيَحْسَبُونَ أَنَّهُم مُّهْتَدُونَ ﴿٣٧﴾

37. Shayaadiintuna waxay ka leexin jidka (xaqa) waxayna isu maleyn inay hanuunsan yihiin (toosan yihiin).

حَتَّىٰٓ إِذَا جَآءَنَا قَالَ يَٰلَيْتَ بَيْنِى وَبَيْنَكَ بُعْدَ ٱلْمَشْرِقَيْنِ فَبِئْسَ ٱلْقَرِينُ ﴿٣٨﴾

38. Markuu noo yimaaddo (gaalku qiyaamada) waxuu ku dhahaa (shaydaanku) shalleytee mey dhexdeenna ahaato «wax la mid ah» fogaanshaha qorrax ka soo bax iyo u dhaca, adaana u xun saaxiib.

Xadiith waxaa ku sugnaaday: hadday adduunyadu u miisaamanto Alle agtiisa garab kaneeco kama waraabiyeen gaal kabbo biyo ah waligeed, waxaa wariyey Tirmidi. Ujeeddaduna ma aha inaan la shaqeysan, shaqada xalaasha ah waa waajib, mase habboona in adduunyo uun loo go'o, oo si waalli ah loo dabo ordo, sidaad aragtid ayaamahan, waxaase jirta aakhiro oo khayr ku dhan yahay, ciddii ka indha beesha quraanka iyo xaqana waxaa lagu diri shaydaan una noqon saaxiib kana leexin xaqa, isagoo u maleyn inuu toosan yahay markeyse qiyaamada tagaan wuu calaacali gaalku, wuxuuna ku sheegi shaydaanka inuu yahay saaxiib kan ugu xun. **[Az-Zukhruf: 33-38].**

وَلَن يَنفَعَكُمُ ٱلْيَوْمَ إِذ ظَّلَمْتُمْ أَنَّكُمْ فِى ٱلْعَذَابِ مُشْتَرِكُونَ ﴿٣٩﴾

39. Wax idiinma tarayso maanta haddaad dulmi fasheen inaad cadaab wadaagtaan (ku kulantaan).

أَفَأَنتَ تُسْمِعُ ٱلصُّمَّ أَوْ تَهْدِى ٱلْعُمْىَ وَمَن كَانَ فِى ضَلَٰلٍ مُّبِينٍ ﴿٤٠﴾

40. Ma adaa wax maqashiin kara wax ma maqle, ma adaase hanuunin kara (toosin kara) wax ma arke iyo cid ku sugan baadi cad.

فَإِمَّا نَذْهَبَنَّ بِكَ فَإِنَّا مِنْهُم مُّنتَقِمُونَ ﴿٤١﴾

41. Haddaan kula tagno adiga (oon ku oofsanno) annaga uunbaa ka aarsan gaalada.

أَوْ نُرِيَنَّكَ ٱلَّذِى وَعَدْنَٰهُمْ فَإِنَّا عَلَيْهِم مُّقْتَدِرُونَ ﴿٤٢﴾

42. Haddaan ku tusinno waxaan u yaboohnay oo cadaab ah, waannu karraa korkooda.

فَٱسْتَمْسِكْ بِٱلَّذِىٓ أُوحِىَ إِلَيْكَ ۖ إِنَّكَ عَلَىٰ صِرَٰطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿٤٣﴾

43. Ee qabso waxa laguu waxyooday Nabiyow waxaad ku sugan tahay jid toosan.

وَإِنَّهُۥ لَذِكْرٌ لَّكَ وَلِقَوْمِكَ ۖ وَسَوْفَ تُسْـَٔلُونَ ﴿٤٤﴾

44. Quraankuna sharaf buu u yahay adiga iyo qoomkaagaba, waana leydin warsan doonaa.

وَسْـَٔلْ مَنْ أَرْسَلْنَا مِن قَبْلِكَ مِن رُّسُلِنَآ أَجَعَلْنَا مِن دُونِ ٱلرَّحْمَٰنِ ءَالِهَةً يُعْبَدُونَ ﴿٤٥﴾

45. Warso kuwaan dirray ee kaa horreeyey oo rasuulladannada ka mid ahaa inaan yeellay Allaha Raxmaana ka sokoow ilaahyaal la caabudo.

Cid dhuntay oo dulmiila ah ciduna ma toosin karto, sidaan ruux dhagala'na wax loo maqashiin karin, mid indhola'na wax loo tusin karin, Alle na wuxuu ballanqaaday inuu ka aarsado gaaladii Nabiga beenisay ee dhibtay, waxaase waajib ah in quraanka si dhab ah loo qabsado, illeen sharafta iyo cisiga muslimiinta yaa iska lehe. Waana la warsan doonaa. Waxa Alle ka soo hadhay oo la caabudana ma ahan kuwo mudan. **[Az-Zukhruf: 39-45].**

46. Dhab ahaan yaan ugu dirray Nabi Muuse isagoo wata aayaadkannaga xagga Fircoon iyo jamaacadiisa, wuxuu yidhi anigu waxaan ahay Rasuulkii Rabbiga caalamka.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا مُوسَىٰ بِـَٔايَـٰتِنَآ إِلَىٰ فِرْعَوْنَ وَمَلَإِيْهِۦ فَقَالَ إِنِّى رَسُولُ رَبِّ ٱلْعَـٰلَمِينَ ﴿٤٦﴾

47. Markuu ula yimid aayaadkannaga waxay noqdeen kuwo ku qosla.

فَلَمَّا جَآءَهُم بِـَٔايَـٰتِنَآ إِذَا هُم مِّنْهَا يَضْحَكُونَ ﴿٤٧﴾

48. Ma tusinno aayad haddii kale wey ka weyn tahay walaasheed (tan kale), waxaanna ku qabannay cadaab inay noqdaan darteed.

وَمَا نُرِيهِم مِّنْ ءَايَةٍ إِلَّا هِىَ أَكْبَرُ مِنْ أُخْتِهَا ۖ وَأَخَذْنَـٰهُم بِٱلْعَذَابِ لَعَلَّهُمْ يَرْجِعُونَ ﴿٤٨﴾

49. Waxay dhaheen kan saaxirka (caalimka) ahaw (Muuse) noogu bari Allehaa wuxuu kugula ballantamay annagu waan hanuuneynaaye.

وَقَالُوا۟ يَـٰٓأَيُّهَ ٱلسَّاحِرُ ٱدْعُ لَنَا رَبَّكَ بِمَا عَهِدَ عِندَكَ إِنَّنَا لَمُهْتَدُونَ ﴿٤٩﴾

50. Markaan ka faydnay xaggooda cadaabkii waxay soo bexeen kuwo buriya (ballankii).

فَلَمَّا كَشَفْنَا عَنْهُمُ ٱلْعَذَابَ إِذَا هُمْ يَنكُثُونَ ﴿٥٠﴾

Qisada Nabi Muuse iyo Nabiyada kale qaarkoodba wax badan bay ku soo aroortay quraanka, waxaase muhiim ah in lagu waano qaato lagana fogaado falalka xun xun. Xaqa ku jees jeeska ballan burintana layska jiro. Waxaana habboon in la toosnaado inta la dhumi ama xumaan la fali. Alle hanna waafajiyo wanaagga. **[Az-Zukhruf: 46-50].**

51. Wuu u dhawaaqay fircoon qoomkiisii wuxuu yidhi miyuusan ii sugnaan xukunka masar, iyo

وَنَادَىٰ فِرْعَوْنُ فِى قَوْمِهِۦ قَالَ يَـٰقَوْمِ أَلَيْسَ لِى مُلْكُ مِصْرَ وَهَـٰذِهِ ٱلْأَنْهَـٰرُ

wabiyadan socda hoostayda, miyeydaan wax arkaynin.

تَجۡرِي مِن تَحۡتِيٓۚ أَفَلَا تُبۡصِرُونَ ٥١

52. Saw anigu kama khayr rooni kan dulleysan een karayn wax caddayn (Nabi Muuse).

أَمۡ أَنَا۠ خَيۡرٞ مِّنۡ هَٰذَا ٱلَّذِي هُوَ مَهِينٞ وَلَا يَكَادُ يُبِينُ ٥٢

53. Maxaa loogu soo tuuri waayey jijimooyin dahab ah, ama maxay ula imaan wayday malaa'ig israac raacsan.

فَلَوۡلَآ أُلۡقِيَ عَلَيۡهِ أَسۡوِرَةٞ مِّن ذَهَبٍ أَوۡ جَآءَ مَعَهُ ٱلۡمَلَٰٓئِكَةُ مُقۡتَرِنِينَ ٥٣

54. Wuxuu (Fircoon) ka dalbaday qoomkiisii inay fududaadaan oo u dheganuglaadaan amarkiisa, wayna adeeceen waxayna ahaayeen qoom faasiqiin ah.

فَٱسۡتَخَفَّ قَوۡمَهُۥ فَأَطَاعُوهُۚ إِنَّهُمۡ كَانُواْ قَوۡمٗا فَٰسِقِينَ ٥٤

55. Markey na cadha galiyeenna waan ka aarsanay xaggooda, waana maanshaynay dhammaan.

فَلَمَّآ ءَاسَفُونَا ٱنتَقَمۡنَا مِنۡهُمۡ فَأَغۡرَقۡنَٰهُمۡ أَجۡمَعِينَ ٥٥

56. Waxaan ka yeelley waano iyo tusaale dadka dambe.

فَجَعَلۡنَٰهُمۡ سَلَفٗا وَمَثَلٗا لِّلۡأٓخِرِينَ ٥٦

Fircoonkii masar aad buu u inkiray xaqana u diiday, sida wax badan quraanku ka warramay, waxaase dhab ah inaan ku jees jeeska samo falayaasha iyo wanaag u yeedhayaasha wax wanaag ah lagala kulmeynin ee khasaare iyo halaag uun lagala kulmi. Tan kale qiimuhu ma aha in xoolo iyo dahab uun lagu siiyo, siduu mooday Fircoon iyo waxa la midka ahna la noqonnin. Waana inaan xumaanta laysku raacin, haddii kale waxaa la noqon dad xun oo dulleysan, mutana ciqaabta Alle iyo inay u noqdaan tusaale kuwa kale. **[Az-Zukhruf: 51-56].**

57. Markaan uga yeellay ina Maryama (Ciise) tusaale, markaasay qoomkaagu Nabiyow buuqaan oo qayliyaan (farax dartii).

* وَلَمَّا ضُرِبَ ٱبۡنُ مَرۡيَمَ مَثَلًا إِذَا قَوۡمُكَ مِنۡهُ يَصِدُّونَ ٥٧

58. Waxayna dheheen ma ilaahyadannaa khayr roon mise isaga, mayna kuugu qaddarin tusaale muran mooyee, waana qoom dood badan.

وَقَالُوٓاْ ءَأَٰلِهَتُنَا خَيۡرٌ أَمۡ هُوَۚ مَا ضَرَبُوهُ لَكَ إِلَّا جَدَلَۢاۚ بَلۡ هُمۡ قَوۡمٌ خَصِمُونَ ٥٨

إِنْ هُوَ إِلَّا عَبْدٌ أَنْعَمْنَا عَلَيْهِ وَجَعَلْنَٰهُ مَثَلًا لِّبَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ﴿٥٩﴾

59. Wax kale ma aha Ciise ee waa uun addoon aan u nicmaynay ugana yeellay tusaale ree bani israa'iil.

وَلَوْ نَشَآءُ لَجَعَلْنَا مِنكُم مَّلَٰٓئِكَةً فِى ٱلْأَرْضِ يَخْلُفُونَ ﴿٦٠﴾

60. Haddaan doonno waxaan idiinka yeeli lahayn malaa'ig baddalkiinna dhulka u hadha.

وَإِنَّهُۥ لَعِلْمٌ لِّلسَّاعَةِ فَلَا تَمْتَرُنَّ بِهَا وَٱتَّبِعُونِ ۚ هَٰذَا صِرَٰطٌ مُّسْتَقِيمٌ ﴿٦١﴾

61. Nabi Ciisana waa calaamadda saacadda (qiyaame) ee ha shakiyina, ina raaca kaasaa ah jidka toosane.

وَلَا يَصُدَّنَّكُمُ ٱلشَّيْطَٰنُ ۖ إِنَّهُۥ لَكُمْ عَدُوٌّ مُّبِينٌ ﴿٦٢﴾

62. Yuuna idinka leexinnin shaydaan (jidka) wuxuu idiin yahay col cade.

Nabi Ciise waa Nabi ay rumaysan yihiin muslimiintu xaqnimadiisa sida Nabiyada kaleba dhammaantood (Alle nabadgalyo korkooda ha yeelee). Waana mucjisooyinka Alle iyo calaamada saacadda qiyaame, hase yeeshee muran iyo shaydaan adeecid waxaan halaag ahayn ma tarto. Jidka toosanse waa in la raaco xaqa uu u soo dhiibay Alle Nabiga Muxamed ah (ammaan iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee).

Abii Umaamo waxaa laga wariyey in Rasuulkii Alle ku soo baxay dad ku murmi quraanka oo uu u cadhooday si daran wajigiisuna casaaday, markaas yidhi: ha ku garaacina kitaabka Alle qaarkiis qaarka kale, ciddii dhumaysana waxaa la siiyaa muran un. **[Az-Zukhruf: 57-62].**

وَلَمَّا جَآءَ عِيسَىٰ بِٱلْبَيِّنَٰتِ قَالَ قَدْ جِئْتُكُم بِٱلْحِكْمَةِ وَلِأُبَيِّنَ لَكُم بَعْضَ ٱلَّذِى تَخْتَلِفُونَ فِيهِ ۖ فَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَأَطِيعُونِ ﴿٦٣﴾

63. Markuu ula yimid Ciise xujooyin wuxuu ku yidhi waxaan idiin la imid xikmad iyo inaan idiin caddeeyo waxaad isku diiddan tihiin qaarkiis ee ka dhawrsada Alle ina adeeca.

إِنَّ ٱللَّهَ هُوَ رَبِّى وَرَبُّكُمْ فَٱعْبُدُوهُ ۚ هَٰذَا صِرَٰطٌ مُّسْتَقِيمٌ ﴿٦٤﴾

64. Alleha (cibaadada naga mudan) isagaa ah Rabbigay iyo Rabbigiinba ee caabuda taasaa ah jidka toosane.

65. Wayse is khilaafeen xisbiyadii dhexdooda halaagna wuxuu u sugnaaday kuwii dulmi falay cadaab maalin daran xaggii.

فَٱخۡتَلَفَ ٱلۡأَحۡزَابُ مِنۢ بَيۡنِهِمۡۖ فَوَيۡلٞ لِّلَّذِينَ ظَلَمُواْ مِنۡ عَذَابِ يَوۡمٍ أَلِيمٖ ٦٥

66. Miyey sugi (gaaladaasi) waxaan saacadda (qiyaame) ahayn inay ugu timaado si kado ah iyagoon ogayn.

هَلۡ يَنظُرُونَ إِلَّا ٱلسَّاعَةَ أَن تَأۡتِيَهُم بَغۡتَةٗ وَهُمۡ لَا يَشۡعُرُونَ ٦٦

Nabi Ciise markii Alle ku soo dajiyey kitaabka injiil ah siiyayna xujooyin cad yey beeniyeen gaaladii isna khilaafeen. Waxaana u sugnaaday gaaladaas cadaab daran, wax uga gargaarina ma jiro, ee ha sugeen qiyaamada kadada ugu imaan iyagoon ogayn. **[Az-Zukhruf: 63-66].**

67. Saaxiibbadu maalinta qiyaame qaarkood qaarka (kale) waa u col kuwa dhawrsaday mooyee (mu'miniinta).

ٱلۡأَخِلَّآءُ يَوۡمَئِذِۭ بَعۡضُهُمۡ لِبَعۡضٍ عَدُوٌّ إِلَّا ٱلۡمُتَّقِينَ ٦٧

68. (Waxaana loo odhan) addoommadaydoow korkiinna cabsi ma aha maanta mana murugoonaysaan.

يَٰعِبَادِ لَا خَوۡفٌ عَلَيۡكُمُ ٱلۡيَوۡمَ وَلَآ أَنتُمۡ تَحۡزَنُونَ ٦٨

69. Waana kuwa rumeeyey aayaadkannaga oo ahaa muslimiinta.

ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ بِـَٔايَٰتِنَا وَكَانُواْ مُسۡلِمِينَ ٦٩

70. (Waxaana lagu dhihi) gala jannada idinkiyo haweenkiinna (ama mu'miniinta idin la midka ah) idinkoo laydiin nicmeeyey (laydin kana farxin).

ٱدۡخُلُواْ ٱلۡجَنَّةَ أَنتُمۡ وَأَزۡوَٰجُكُمۡ تُحۡبَرُونَ ٧٠

71. Waxaana lala kor socon weelal (saxammo) dahab ah iyo koobab, waxayna ka heli (jannada) dhexdeeda waxay doonto naftu kuna raaxaystaan indhuhu idinkoo dhexdeeda ku waari.

يُطَافُ عَلَيۡهِم بِصِحَافٖ مِّن ذَهَبٖ وَأَكۡوَابٖۖ وَفِيهَا مَا تَشۡتَهِيهِ ٱلۡأَنفُسُ وَتَلَذُّ ٱلۡأَعۡيُنُۖ وَأَنتُمۡ فِيهَا خَٰلِدُونَ ٧١

72. Taasina waa jannadii aad ku dhaxasheen waxaad camalfalayseen.

وَتِلْكَ ٱلْجَنَّةُ ٱلَّتِىٓ أُورِثْتُمُوهَا بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٧٢﴾

73. Waxaadna ku leedihiin dhexdeeda faakiho badan ood xaggeeda wax ka cuntaan.

لَكُمْ فِيهَا فَٰكِهَةٌ كَثِيرَةٌ مِّنْهَا تَأْكُلُونَ ﴿٧٣﴾

Saaxiibnimadu waxay qiima leedahay markey ku dhisan tahay islaamnimo, wanaag is farid, xumaan iska reebid iyo dar Alle, taasaana wax anfacda adduun iyo aakhiraba, marse hadday tahay xumaan ku saaxiib iyo adduunyo darteed waa khasaare labada daaroodba' iyo kala carar markay dhibaato timaado. Addoomada Alle ee wanaagsanna waxay mudan khayr janno. Wax badanna wuxuu quraanku ka warramay wanaagga jannada loo darbey, iyagoo ku waari iyaga iyo ehelkoodii wanaagsanaa. Rasuulkuna wuxuu yidhi: hadday labo nin isu jeclaadaan dar Alle oo midkood bari jiro midna gelbeed wuu kulmin dhexdooda maalinta qiyaame isagoo dhihi waaka kaad u jeclaatay dartay.

Ibnu Cabaas iyo Mujaahidna waxay dhaheen: waxay noqon saaxiibnimo kasta maalinta qiyaame col kuwa dhawrsada mooyee. **[Az-Zukhruf: 67-73].**

74. Dambiilayaashu waxay gali cadaabka jahannamo iyagoo ku waari.

إِنَّ ٱلْمُجْرِمِينَ فِى عَذَابِ جَهَنَّمَ خَٰلِدُونَ ﴿٧٤﴾

75. Lagamana fudaydiyo, dhexdiiseyna ku quustaan.

لَا يُفَتَّرُ عَنْهُمْ وَهُمْ فِيهِ مُبْلِسُونَ ﴿٧٥﴾

76. Manaan dulmiyin hasa yeeshee iyagaa dulmiilayaal ahaa.

وَمَا ظَلَمْنَٰهُمْ وَلَٰكِن كَانُوا۟ هُمُ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٧٦﴾

77. Waxayna u dhawaaqi maalig (malagga naarta) iyagoo dhihi Allehaa ha na dilo markaasuu dhahaa idinku waad ku waaraysaan (naarta).

وَنَادَوْا۟ يَٰمَٰلِكُ لِيَقْضِ عَلَيْنَا رَبُّكَ ۖ قَالَ إِنَّكُم مَّٰكِثُونَ ﴿٧٧﴾

78. Dhab ahaan baan idiin la nimid xaq hasa yeeshee badankiin xaquu nacay.

لَقَدْ جِئْنَٰكُم بِٱلْحَقِّ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَكُمْ لِلْحَقِّ كَٰرِهُونَ ﴿٧٨﴾

79. Ma waxbayse gooyeen gaaladu oo amar ah (dhibka Nabiga)

أَمْ أَبْرَمُوٓا۟ أَمْرًا فَإِنَّا مُبْرِمُونَ ﴿٧٩﴾

annaguna waxbaan goynaynaa (ciqaabtooda).

أَمْ يَحْسَبُونَ أَنَّا لَا نَسْمَعُ سِرَّهُمْ وَنَجْوَىٰهُم ۚ بَلَىٰ وَرُسُلُنَا لَدَيْهِمْ يَكْتُبُونَ ﴿٨٠﴾

80. Mise waxay u maleeyeen inaannaan maqlayn qarsoodigooda iyo muujintoodaba, saas ma ah ee mala'igtannadaa agtooda wax ku qoro.

Alle wuxuu ka abaal marin cidkastaa waxay kasbatay, dambiilayaashana wuxuu galin naar joogta ahooy ku dhex quusan, mana uusan dulmiyin ee iyagaa is dulmiyey, waxna uma tarto geeri la doono iyo calaacal mar hadday xaqii diideen naarna lagu xukumay, dhagar iyo khayaamana wax ma tarto ee waxay dhibtaa saaxiibkeed, illeen Alle waa wax walba oge, malaa'igtiisuna waxay qortaa wax kastee. Mujaahid wuxuu yidhi: waxay dooneen gaaladii dhagar shar markaasaa Alle ku abaal mariyey. **[Az-Zukhruf: 74-80].**

قُلْ إِن كَانَ لِلرَّحْمَٰنِ وَلَدٌ فَأَنَا۠ أَوَّلُ ٱلْعَٰبِدِينَ ﴿٨١﴾

81. Waxaad dhahdaa Nabiyow haddii Allaha Raxmaan ah uu u sugnaado ilmo anaa u hor caabudi lahaa (isagoo tilmaantaa aad sheegteen ku tilmaaman, laakiin ilmo ma leh, sidaa darteed waxaan ku caabudayaa inaanu ilmo laheyn).

سُبْحَٰنَ رَبِّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ رَبِّ ٱلْعَرْشِ عَمَّا يَصِفُونَ ﴿٨٢﴾

82. Waxaa ka nasahan Rabbiga samooyinka iyo dhulka ee Rabbiga carshiga ah waxay ku tilmaamaan.

فَذَرْهُمْ يَخُوضُوا۟ وَيَلْعَبُوا۟ حَتَّىٰ يُلَٰقُوا۟ يَوْمَهُمُ ٱلَّذِى يُوعَدُونَ ﴿٨٣﴾

83. Ee ka tag ha dhunbadeen (xumaanta) hana ciyaareen intay kala kulmaan maalintoodii loo yaboohaye.

وَهُوَ ٱلَّذِى فِى ٱلسَّمَآءِ إِلَٰهٌ وَفِى ٱلْأَرْضِ إِلَٰهٌ ۚ وَهُوَ ٱلْحَكِيمُ ٱلْعَلِيمُ ﴿٨٤﴾

84. Alle waa macbuudka samada iyo macbuudka dhulka, waana falsame wax og.

85. Waxaana barako badnaaday (sarreeyeyna) Allaha iska leh xukunka samooyinka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya, agtiisaana ah ogaanshaha saacadda (qiyaame) xaggiisaana laydiin celin.

وَتَبَارَكَ ٱلَّذِى لَهُۥ مُلْكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا وَعِندَهُۥ عِلْمُ ٱلسَّاعَةِ وَإِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿٨٥﴾

86. Mana hantaan kuway caabudeen Alle ka sokow wax shafeeca ah, hasa yeeshee ciddii xaqa qirta iyagoo og (waxbay u shafeeci idanka Alle ka dib).

وَلَا يَمْلِكُ ٱلَّذِينَ يَدْعُونَ مِن دُونِهِ ٱلشَّفَٰعَةَ إِلَّا مَن شَهِدَ بِٱلْحَقِّ وَهُمْ يَعْلَمُونَ ﴿٨٦﴾

87. Haddaad warsato gaalada yaa abuuray iyaga waxay dhihi Alle, ee xaggee loo iili.

وَلَئِن سَأَلْتَهُم مَّنْ خَلَقَهُمْ لَيَقُولُنَّ ٱللَّهُ ۖ فَأَنَّىٰ يُؤْفَكُونَ ﴿٨٧﴾

88. (Waxaana Alle agtiisa ah ogaanshaha) hadalkii Nabiga ee uu yidhi: Rabbiyow kuwani waa qoom aan rumaynayn (xaqa).

وَقِيلِهِۦ يَٰرَبِّ إِنَّ هَٰٓؤُلَآءِ قَوْمٌ لَّا يُؤْمِنُونَ ﴿٨٨﴾

89. Iska saamax waxaadna dhahdaa nabadgalyo (aan kala badbaadno), way ogaan doonaan (waxa ku dhacee).

فَٱصْفَحْ عَنْهُمْ وَقُلْ سَلَٰمٌ ۚ فَسَوْفَ يَعْلَمُونَ ﴿٨٩﴾

Alle sarreeye ilmo ma leh, illeen uma baahnee, waana ka fogyahay ceeb iyo xumaan oo dhan, waana Ilaaha xaqa ah ee cirka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeyaba, xukunkoodana isagaa iska leh ogna waqtiga qiyaamada, xaggiisaana loo noqon, wax shafeeca hanta oo Alle ka soo hadhayna ma jiro, cid xaqa raacda oo Alle idmo mooyee. Gaaladuna waa qirsan yihiin in Alle abuuray ee waxay u diidi inay cibaadada u kali yeelaan isla wayni, doqonnimo iyo inay xumaanta iska dabaashaan xisaab la'aan ee ha sugeen tan iyo abaalmarinta. Suddi wuxuu yidhi: macnuhu waxaa weeye hadduu Alle ilmo leeyahay anaa u hor rumeyn lahaa inuu ilmo leeyahay, hasa yeeshee ilmo ma leh. **[Az-Zukhruf: 81-89].**

Suurat Ad-Dukhaan

سُورَةُ الدُّخَانِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waannu sheegnay iyadoo kale.

حمٓ ﴿١﴾

2. Waxaan ku dhaartay kitaabka cade (quraanka).

وَٱلْكِتَٰبِ ٱلْمُبِينِ ﴿٢﴾

3. Annagaa dejinnay quraanka habeen barakeysan (layletul qadar) annagaana wax u digi.

إِنَّآ أَنزَلْنَٰهُ فِى لَيْلَةٍ مُّبَٰرَكَةٍ ۚ إِنَّا كُنَّا مُنذِرِينَ ﴿٣﴾

4. Habeenkaasaana la kala bixiyaa amar kastoo xigmo leh.

فِيهَا يُفْرَقُ كُلُّ أَمْرٍ حَكِيمٍ ﴿٤﴾

5. Waana amar agtannada ka ahaaday, annagaana wax dirra (rasuullo).

أَمْرًا مِّنْ عِندِنَآ ۚ إِنَّا كُنَّا مُرْسِلِينَ ﴿٥﴾

6. Naxariis ka ahaatey xagga Allehaa (darteed ayaan u soo dirnay), Alle ayaana wax maqle ah wax og.

رَحْمَةً مِّن رَّبِّكَ ۚ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْعَلِيمُ ﴿٦﴾

7. Waana Rabbiga samooyinka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya haddaad yaqiinsanaysaan.

رَبِّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَآ ۖ إِن كُنتُم مُّوقِنِينَ ﴿٧﴾

8. Allaah mooyee ilaah kale oo xaq lugu caabudo ma jiro, isagaa wax nooleeya waxna dila, waana Rabbigiina iyo Rabbiga aabbayaalkiinnii horreeyey.

لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ يُحْىِۦ وَيُمِيتُ ۖ رَبُّكُمْ وَرَبُّ ءَابَآئِكُمُ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿٨﴾

Alle sarreeye wuxuu ku dhaartay inuu soo dajiyay kitaabka quraanka ah habeen barakeysan oo wax kasto la kalo bixiyo, waana habeenka laylatulqaddarka ee bisha soon ku jirta ee quraanka la soo dajiyey siday aayado kale caddeeyeen, saasaana sugan, cidda tidhi waa shan iyo tobanka bisha shacbaan wax xujo ah oo cad ma hayso.

Alle na waa naxariiste, maqle, oge oo xukunka caalamka iska leh, wax nooleeya waxna dila, waana Rabbiga khalqiga dhammaan hor iyo dibba, ee waa in laga yaabo Alle si dhab ah. **[Ad-Dukhaan: 1-8].**

بَلْ هُمْ فِي شَكٍّ يَلْعَبُونَ ﴿٩﴾

9. Waxayse ku sugan yihiin shaki, wayna ciyaari.

فَٱرْتَقِبْ يَوْمَ تَأْتِي ٱلسَّمَآءُ بِدُخَانٍ مُّبِينٍ ﴿١٠﴾

10. Ee sug maalinta uu la imaan cirku qiiq muuqda (abaar daran darteed).

يَغْشَى ٱلنَّاسَ ۖ هَٰذَا عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١١﴾

11. Oo dabooli dadka, kaasina waa cadaab daran.

رَّبَّنَا ٱكْشِفْ عَنَّا ٱلْعَذَابَ إِنَّا مُؤْمِنُونَ ﴿١٢﴾

12. Waxayna dheheen Allow naga fayd cadaabka waxaan nahay mu'miniine.

أَنَّىٰ لَهُمُ ٱلذِّكْرَىٰ وَقَدْ جَآءَهُمْ رَسُولٌ مُّبِينٌ ﴿١٣﴾

13. Goormey waantoobi isagoos u yimid Rasuul cad «muuqda».

ثُمَّ تَوَلَّوْا۟ عَنْهُ وَقَالُوا۟ مُعَلَّمٌ مَّجْنُونٌ ﴿١٤﴾

14. Markaasay ka jeedsadeen Nabiga waxayna dheheen waa wax la bare waalan.

إِنَّا كَاشِفُوا۟ ٱلْعَذَابِ قَلِيلًا ۚ إِنَّكُمْ عَآئِدُونَ ﴿١٥﴾

15. Annagu waxaan idinka faydaynaa cadaabka wax yar, idinkuna waxaad ku noqonaysaan xumaanta.

يَوْمَ نَبْطِشُ ٱلْبَطْشَةَ ٱلْكُبْرَىٰ ۚ إِنَّا مُنتَقِمُونَ ﴿١٦﴾

16. Maalintaan qabanayno qabashada wayn (qiyaamada) (ama Badar) waannu aarsan.

Nabigu wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): Allihiin wuxuu idiinka digay saddex: qiiq u qabta mu'minka sida hargab gaalkana qabta intuu meel walba ka baxo, iyo daabbad iyo dajaal, waxaa wariyey Ibnu Jariir iyo Dhabraani. Madax adayg iyo gaalnimana wax ma taraan illeen Alle

ayaa ka aarsan gaalo iyo xaq diidayaasha ku tilmaami Nabiga inuu waalan yahay, kuwaasi wax yar ha sugeen. **[Ad-Dukhaan: 9-16].**

17. Dhab ahaan baan imtixaannay hortood qoomkii fircoon, waxaana u yimid rasuul sharaf leh.

* وَلَقَدْ فَتَنَّا قَبْلَهُمْ قَوْمَ فِرْعَوْنَ وَجَآءَهُمْ رَسُولٌ كَرِيمٌ ﴿١٧﴾

18. Isagoo dhihi ii dhiiba addoommada Alle (ama maqalka baaqayga) waxaan idiin ahay rasuul aammin ah.

أَنْ أَدُّوٓاْ إِلَيَّ عِبَادَ ٱللَّهِ ۖ إِنِّي لَكُمْ رَسُولٌ أَمِينٌ ﴿١٨﴾

19. Hana iska wayneynina Alle waxaan idiin la imid xujo cade.

وَأَن لَّا تَعْلُواْ عَلَى ٱللَّهِ ۖ إِنِّيٓ ءَاتِيكُم بِسُلْطَٰنٍ مُّبِينٍ ﴿١٩﴾

20. Waxaana ka magan galay Rabbigey iyo Rabbigiin inaad i dhagaxyeysaan.

وَإِنِّي عُذْتُ بِرَبِّي وَرَبِّكُمْ أَن تَرْجُمُونِ ﴿٢٠﴾

21. Ee haddaydaan i rumeyn iga fogaada (i daaya).

وَإِن لَّمْ تُؤْمِنُواْ لِي فَٱعْتَزِلُونِ ﴿٢١﴾

22. Wuxuuna u qaylyey Allehiis in kuwaasu yihiin qoom dambiilayaal ah.

فَدَعَا رَبَّهُۥٓ أَنَّ هَٰٓؤُلَآءِ قَوْمٌ مُّجْرِمُونَ ﴿٢٢﴾

23. Guuri addoommadayda habeennimo, waa laydin raaciye.

فَأَسْرِ بِعِبَادِي لَيْلًا إِنَّكُم مُّتَّبَعُونَ ﴿٢٣﴾

24. Kana tag badda iyadoo xasilloon oo furan iyagu waa col la maanshayne.

وَٱتْرُكِ ٱلْبَحْرَ رَهْوًا ۖ إِنَّهُمْ جُندٌ مُّغْرَقُونَ ﴿٢٤﴾

Wax badan yuu quraanku ka warramay fircoon iyo qoomkiisii iyo Nabi Muuse, iyo wixii isku qabsaday, waxay ku dambaysay oo ah xaqii oo kor maray, iyo gaaladii oo la halaagay, waxaase loo baahan yahay uun in lagu waano qaato, lagana leexdo jidka gaalada. **[Ad-Dukhaan: 17-24].**

25. Immisey ka tageen beero iyo ilo.

كَمْ تَرَكُواْ مِن جَنَّٰتٍ وَعُيُونٍ ﴿٢٥﴾

26. Iyo tallaal iyo meel sharaf leh.

وَزُرُوعٍ وَمَقَامٍ كَرِيمٍ ﴿٢٦﴾

27. Iyo nicmooyin ay ku raaxaysanayeen.

وَنَعْمَةٍ كَانُوا۟ فِيهَا فَٰكِهِينَ ﴿٢٧﴾

28. Xaalkuna waa saas, waxaanna dhaxalsiinnay qoom kale.

كَذَٰلِكَ ۖ وَأَوْرَثْنَٰهَا قَوْمًا ءَاخَرِينَ ﴿٢٨﴾

29. Uma ooyin samada iyo dhulku korkooda, lamana sugin.

فَمَا بَكَتْ عَلَيْهِمُ ٱلسَّمَآءُ وَٱلْأَرْضُ وَمَا كَانُوا۟ مُنظَرِينَ ﴿٢٩﴾

30. Waana ka korinnay ree bani israa'iil cadaab wax dulleeya.

وَلَقَدْ نَجَّيْنَا بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ مِنَ ٱلْعَذَابِ ٱلْمُهِينِ ﴿٣٠﴾

31. Fircoon (baan ka korinnay) wuxuuna ahaa isla weyne xadgudbayaasha ka mid ah.

مِن فِرْعَوْنَ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ عَالِيًا مِّنَ ٱلْمُسْرِفِينَ ﴿٣١﴾

32. Waxaanna ka doorannay (dadkii waqtigoodii) annagoo og.

وَلَقَدِ ٱخْتَرْنَٰهُمْ عَلَىٰ عِلْمٍ عَلَى ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٣٢﴾

33. Waxaanna siinnay aayado imtixaan cad ku sugan yahay.

وَءَاتَيْنَٰهُم مِّنَ ٱلْءَايَٰتِ مَا فِيهِ بَلَٰٓؤٌا۟ مُّبِينٌ ﴿٣٣﴾

Raaxo adduunyo iyo ku nicmeysigeedu wax ma tarto hadday ciqaab iyo halaag ka dambeyni, taasoo ah nicmadoo laga wareejiyo iyo cidhib xun sidii fircoon iyo qoomkiisii lagu falay cir iyo dhul midna ma xusuusan umana ooyin, nicmadana waxaa lagu dhawraa mahad Alle iyo toosnaan. Mujaahid iyo Sufyaan waxaa laga wariyay in cirka iyo dhulku u ooyi mu'minka afartan maalmood (markuu dhinto). **[Ad-Dukhaan: 25-33].**

34. Kuwaasi (gaaladu) waxay dhihi.

إِنَّ هَٰٓؤُلَآءِ لَيَقُولُونَ ﴿٣٤﴾

35. Arrintu ma aha geerida hore mooyee, mana nihin kuwo la soo bixin.

إِنْ هِىَ إِلَّا مَوْتَتُنَا ٱلْأُولَىٰ وَمَا نَحْنُ بِمُنشَرِينَ ﴿٣٥﴾

36. Noo keena aabayowganno haddaad run sheegaysaan.

فَأْتُوا۟ بِـَٔابَآئِنَآ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٣٦﴾

37. Miyagaa khayr roon mise qoomkii tubbac iyo kuwii ka horreeyey waan halaagnay waxayna ahaayeen dambiilayaal.

أَهُمْ خَيْرٌ أَمْ قَوْمُ تُبَّعٍ وَٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ ۚ أَهْلَكْنَٰهُمْ ۖ إِنَّهُمْ كَانُوا۟ مُجْرِمِينَ ﴿٣٧﴾

38. Samooyinka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya umaannaan abuurin ciyaar.

وَمَا خَلَقْنَا ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَا لَٰعِبِينَ ﴿٣٨﴾

39. Mana aannaan u abuurin wax aan xaq ahayn, hasa yeeshee badankood ma oga.

مَا خَلَقْنَٰهُمَآ إِلَّا بِٱلْحَقِّ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٣٩﴾

40. Maalinta kala bixinta yaa ballan u ah dhammaan.

إِنَّ يَوْمَ ٱلْفَصْلِ مِيقَٰتُهُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٤٠﴾

41. Waana maalintaan qaraabannimo waxba laysugu tarayn laysuna gargaarayn.

يَوْمَ لَا يُغْنِى مَوْلًى عَن مَّوْلًى شَيْـًٔا وَلَا هُمْ يُنصَرُونَ ﴿٤١﴾

42. Cid Alle u naxariisto mooyee, illeen waa adkaade naxariistee.

إِلَّا مَن رَّحِمَ ٱللَّهُ ۚ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلرَّحِيمُ ﴿٤٢﴾

Cid diida oo isla wayn iyo cid kalaba Alle wuu dili wuuna soo nooleyn, dhabtuna waa saas, Alle na wuxuu u abuuray cirka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeyaba xaq iyo in lays abaal mariyo, arrintana maalintaas Alle ayaa iska leh, wax isu gargaari ama wax isu tarina ma jiro, cid Alle u naxariisto mooyee waana arrin ay waajib tahay in aad loo eego looguna darbado. **[Ad-Dukhaan: 34-42].**

43. Geedka zaquumka ah.

إِنَّ شَجَرَتَ ٱلزَّقُّومِ ﴿٤٣﴾

44. Waa cunnada dambi badanaha.

طَعَامُ ٱلْأَثِيمِ ﴿٤٤﴾

45. Waana laami oo kale kuna kari caloosha.

كَٱلْمُهْلِ يَغْلِى فِى ٱلْبُطُونِ ﴿٤٥﴾

46. Sida karidda xamiimka (kulayl daran) oo kale.

كَغَلْىِ ٱلْحَمِيمِ ﴿٤٦﴾

47. (Waxaana lagu dhihi) qabta gaalka una jiida jaxiimo dhexdeeda.

خُذُوهُ فَٱعْتِلُوهُ إِلَىٰ سَوَآءِ ٱلْجَحِيمِ ﴿٤٧﴾

48. Markaas ku shuba madaxiisa korkiisa cadaab kulul.

ثُمَّ صُبُّوا۟ فَوْقَ رَأْسِهِۦ مِنْ عَذَابِ ٱلْحَمِيمِ ﴿٤٨﴾

49. (Waxaana lagu dhihi) dhadhami (cadaabka) waxaad tahay adkaade sharaf lehe.

ذُقْ إِنَّكَ أَنتَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْكَرِيمُ ﴿٤٩﴾

50. Kaasina waa kaad ahaydeen kuwo shakiya (cadaabka).

إِنَّ هَٰذَا مَا كُنتُم بِهِۦ تَمْتَرُونَ ﴿٥٠﴾

51. Kuwa dhawrsadana waxay ku sugnaan meel aammin ah.

إِنَّ ٱلْمُتَّقِينَ فِى مَقَامٍ أَمِينٍ ﴿٥١﴾

52. Jannooyin iyo ilo (yey ku sugnaan).

فِى جَنَّٰتٍ وَعُيُونٍ ﴿٥٢﴾

53. Waxayna xidhan xariir jilicsan iyo mid adag (oo dhalaali) wayna is qaabili.

يَلْبَسُونَ مِن سُندُسٍ وَإِسْتَبْرَقٍ مُّتَقَٰبِلِينَ ﴿٥٣﴾

54. Saasoo kale waxaa u sugnaaday haween indho waaweyn.

كَذَٰلِكَ وَزَوَّجْنَٰهُم بِحُورٍ عِينٍ ﴿٥٤﴾

55. Waxayna u yeedhan jannada dhexdeeda khudaar kasta iyagoo aammin ah.

يَدْعُونَ فِيهَا بِكُلِّ فَٰكِهَةٍ ءَامِنِينَ ﴿٥٥﴾

56. Mana ku dhadhamiyaan jannada dhexdeeda geeri, geeridii hore mooye, wuxuuna ka dhawray (Alle) cadaabka jaxiimo.

لَا يَذُوقُونَ فِيهَا ٱلْمَوْتَ إِلَّا ٱلْمَوْتَةَ ٱلْأُولَىٰ ۖ وَوَقَىٰهُمْ عَذَابَ ٱلْجَحِيمِ ﴿٥٦﴾

57. Waana fadliga Allehaa, taasina waa liibaanta wayn.

فَضْلًا مِّن رَّبِّكَ ۚ ذَٰلِكَ هُوَ ٱلْفَوْزُ ٱلْعَظِيمُ ﴿٥٧﴾

58. Waxaan ugu fududaynay quraanka carrabkaaga inay waantoobaan.

فَإِنَّمَا يَسَّرْنَٰهُ بِلِسَانِكَ لَعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ ﴿٥٨﴾

59. Ee sug iyaguna way sugiye.

فَٱرْتَقِبْ إِنَّهُم مُّرْتَقِبُونَ ﴿٥٩﴾

Rasuulku wuxuu yidhi: (ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee): waxaa lagu odhan ehelu jannaha waxaa idiin sugnaaday inaad caafimaadsanaataan oydaan bukoonnin waligiin, iyo inaad noolaataan oydaan dhimannin waligiin, iyo inaad nicmeysataan oydaan rafaadin waligiin, iyo inaad da'yaraatan oydaan gaboobin waligiin. Waxaa wariyay Muslim. Dhabtuna waa inay arrintaasu tahay liibaanta wayn, ee gaalo ha sugto dulli iyo ciqaab, mu'miniintuna sharaf iyo wanaag. **[Ad-Dukhaan: 43-59].**

Suurat Al-Jaathiyah

سُورَةُ الجَاثِيَةِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waa soo hormaray macnaheedu.

حمٓ ﴿١﴾

2. Soo dajinta kitaabka (quraanka) ah wuxuu ka ahaaday Allaha adkaada ee falka san.

تَنزِيلُ ٱلْكِتَٰبِ مِنَ ٱللَّهِ ٱلْعَزِيزِ ٱلْحَكِيمِ ﴿٢﴾

3. Samooyinka iyo dhulka dhexdiisana aayaadbaa ugu sugan mu'miniinta.

إِنَّ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ لَءَايَٰتٍ لِّلْمُؤْمِنِينَ ﴿٣﴾

4. Abuurkiinna iyo waxa Alle ku fidin «abuuri» dhulka oo wax socda ah aayaad baa ugu sugan ciddii wax yaqiinsan.

وَفِى خَلْقِكُمْ وَمَا يَبُثُّ مِن دَآبَّةٍ ءَايَٰتٌ لِّقَوْمٍ يُوقِنُونَ ﴿٤﴾

5. Iskhilaafka habeenka iyo maalinta iyo waxa Alle ka soo dajiyey samada oo rizqi ah oo ku nooleeyo dhulka intuu dhintay ka dib iyo gagaddoonka dabaylaha waxaa ugu sugan aayaad ciddii wax kasi.

وَٱخْتِلَٰفِ ٱلَّيْلِ وَٱلنَّهَارِ وَمَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مِن رِّزْقٍ فَأَحْيَا بِهِ ٱلْأَرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَا وَتَصْرِيفِ ٱلرِّيَٰحِ ءَايَٰتٌ لِّقَوْمٍ يَعْقِلُونَ ﴿٥﴾

Quraanka sharafta leh Alle ayaa soo dajiyay, samada, dhulka wax kasta ee Alle ku fidiyay dhulka, habeenka, maalinta, roobka iyo gagaddoonka dabaylaha waxay aayaad iyo calaamo ugu sugan tahay mu'miniinta xaqa yaqiinsan ee wax kasi, waana in la raaco amarka Allaha ahaysiiyey waxyaalahaa, laguna dhaqmo kitaabkiisa, rumeyn, xukun, akhlaaq, mucaamalo iyo wax kastoo tallaaba ah. **[Al-Jaathiyah: 1-5].**

تِلْكَ ءَايَٰتُ ٱللَّهِ نَتْلُوهَا عَلَيْكَ بِٱلْحَقِّ ۖ فَبِأَىِّ حَدِيثٍ بَعْدَ ٱللَّهِ وَءَايَٰتِهِۦ يُؤْمِنُونَ ﴿٦﴾

6. Taasi waa aayaadka Alle aan ku akhriyeyno korkaaga si xaq ah, ee hadalkay Alle ka dib iyo aayaadkiisa rumayn.

وَيْلٌ لِّكُلِّ أَفَّاكٍ أَثِيمٍ ﴿٧﴾

7. Halaagna wuxuu u sugnaaday beenaale dambi badan dhammaantiis.

يَسْمَعُ ءَايَٰتِ ٱللَّهِ تُتْلَىٰ عَلَيْهِ ثُمَّ يُصِرُّ مُسْتَكْبِرًا كَأَن لَّمْ يَسْمَعْهَا ۖ فَبَشِّرْهُ بِعَذَابٍ أَلِيمٍ ﴿٨﴾

8. Oo maqli aayaadka Alle oo la akhrin haddana daa'ima gaalnimo, isagoo iskibrin sidii isagoon maqlin, ugu bishaaree cadaab daran.

وَإِذَا عَلِمَ مِنْ ءَايَٰتِنَا شَيْـًٔا ٱتَّخَذَهَا هُزُوًا ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ لَهُمْ عَذَابٌ مُّهِينٌ ﴿٩﴾

9. Markuu ogaado aayaadkannaga wax ka mid ah wuxuu ka yeeshaa jeesjees, kuwaasina waxaa u sugnaaday cadaab wax dulleeya.

مِّن وَرَآئِهِمْ جَهَنَّمُ ۖ وَلَا يُغْنِى عَنْهُم مَّا كَسَبُوا۟ شَيْـًٔا وَلَا مَا ٱتَّخَذُوا۟ مِن دُونِ ٱللَّهِ أَوْلِيَآءَ ۖ وَلَهُمْ عَذَابٌ عَظِيمٌ ﴿١٠﴾

10. Waxaa koobi, «kana dambeysa» naarta jahannamo, waxna uma taro waxay kasbadeen, iyo waxay ka yeesheen Alle ka sokow owliyo, waxayna mudan cadaab wayn.

هَٰذَا هُدًى ۖ وَٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ بِـَٔايَٰتِ رَبِّهِمْ لَهُمْ عَذَابٌ مِّن رِّجْزٍ أَلِيمٌ ﴿١١﴾

11. Quraankani waa hanuun, kuwii ka gaaloobay aayaadka Allehoodna waxaa u sugnaaday cadaab xumaan daran.

Cid quraanka rumeyn wayday wax xaq ah oo kale ma rumeyso, been badane, dambi badane maqla quraankoo la akhrin markaas iskibriya xumaanna ku madaxtaagi, kuna jeesjeesi quraanka waxaa u sugnaaday cadaab daran oo wax dulleeya, wax Alle ka sokeeya oo wax u tarina ma jiro, ee xaqa cad uun ha la raaco isagaa wax taree. **[Al-Jaathiyah: 6-11].**

٭ ٱللَّهُ ٱلَّذِى سَخَّرَ لَكُمُ ٱلْبَحْرَ لِتَجْرِىَ ٱلْفُلْكُ فِيهِ بِأَمْرِهِۦ وَلِتَبْتَغُوا۟ مِن فَضْلِهِۦ وَلَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿١٢﴾

12. Alle waa kan idiin fududeeyey badda say ugu socoto doonnidu «iyo markabku» dhexdiisa amarka Alle, iyo inaad raadsataan oo

aad gaadhaan fadligiisa (laga helo ganacsiga),iyo inaad ku mahadisaan.

13. Wuxuu idiin fududeeyey waxa ku sugan samooyinka iyo dhulka dhammaan xaggiisay ka ahaadeen, arrintaasna waxa ugu sugan aayaad ciddii fikiri.

وَسَخَّرَ لَكُم مَّا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلْأَرْضِ جَمِيعًا مِّنْهُ ۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَآيَٰتٍ لِّقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ ﴿١٣﴾

14. Waxaad u dhahdaa kuwa rumeeyey u dhaafa kuwaan ka yaabayn ciqaabta Alle si uu uga abaal mariyo qoom waxay kasbadeen.

قُل لِّلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ يَغْفِرُوا۟ لِلَّذِينَ لَا يَرْجُونَ أَيَّامَ ٱللَّهِ لِيَجْزِىَ قَوْمًۢا بِمَا كَانُوا۟ يَكْسِبُونَ ﴿١٤﴾

15. Ruuxii camal fiican fala naftiisuu u falay, ruuxii xumaan sameeyana waxay uun dhibi naftiisa markaas xagga Alle uun baa laydiin celin.

مَنْ عَمِلَ صَٰلِحًا فَلِنَفْسِهِۦ ۖ وَمَنْ أَسَآءَ فَعَلَيْهَا ۖ ثُمَّ إِلَىٰ رَبِّكُمْ تُرْجَعُونَ ﴿١٥﴾

Wax kasta Alle ayaa abuuray isagaana sakhiray, sida badda, markabka, waxa samada ku sugan iyo waxa dhulka ku sugan, dhammaanna xagga Alle yey ka ahaadeen, oo ma jiro wax la wadaaga Alle maamulka, waxaa uun la dhex dabaalan nicmada Alle iyo khalqigiisa, waase in la fikiro, camal wanaagsanna lala yimaaddo, xumaantana laga fogaado, mana habboona in nicmada Alle iyo fadligiisa lagu kibro laysna weyneeyo adoon waxba ahayn, kuna turrayn, oo miskiin ah. **[Al-Jaathiyah: 12-15].**

16. Dhab ahaan baan u siinnay ree binii israa'iil kitaabka iyo xukun iyo Nabinnimo, waxaanna ku arzuqnay wax wanaagsan, waxaanna ka fadillay caalamkii (markaas).

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ٱلْكِتَٰبَ وَٱلْحُكْمَ وَٱلنُّبُوَّةَ وَرَزَقْنَٰهُم مِّنَ ٱلطَّيِّبَٰتِ وَفَضَّلْنَٰهُمْ عَلَى ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿١٦﴾

17. Waxaanna siinnay xujooyin ka mid ah amar, ismana khilaafin, inta cilmi u yimid ka dib mooyee, waxayna u diideen xasad iyo dulmi, dhexdooda ah, Rabbigaana

وَءَاتَيْنَٰهُم بَيِّنَٰتٍ مِّنَ ٱلْأَمْرِ ۖ فَمَا ٱخْتَلَفُوٓا۟ إِلَّا مِنۢ بَعْدِ مَا جَآءَهُمُ ٱلْعِلْمُ بَغْيًۢا بَيْنَهُمْ ۚ إِنَّ رَبَّكَ يَقْضِى بَيْنَهُمْ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ فِيمَا كَانُوا۟ فِيهِ يَخْتَلِفُونَ ﴿١٧﴾

wuu kala xukumi dhexdooda maalinta qiyaame waxay isku khilaafsan yihiin.

18. Waxaanna ku yeellay waddo amarka diinta ah, ee raac, hana raacin hawada kuwaan wax ogayn.

ثُمَّ جَعَلْنَٰكَ عَلَىٰ شَرِيعَةٍ مِّنَ ٱلْأَمْرِ فَٱتَّبِعْهَا وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَآءَ ٱلَّذِينَ لَا يَعْلَمُونَ ﴿١٨﴾

19. Iyagu kaagama taraan Alle xaggiisa waxba, daalimiintana qaarkood wuxuu u yahay sokeeye qaarka kale, Alle na waa u wali kuwa dhawrsada.

إِنَّهُمْ لَن يُغْنُوا۟ عَنكَ مِنَ ٱللَّهِ شَيْـًٔا ۚ وَإِنَّ ٱلظَّٰلِمِينَ بَعْضُهُمْ أَوْلِيَآءُ بَعْضٍ ۖ وَٱللَّهُ وَلِىُّ ٱلْمُتَّقِينَ ﴿١٩﴾

20. Kaasi (quraanku) waa aragti (nuurka) dadka iyo hanuun iyo naxariis, ciddii wax yaqiinsan.

هَٰذَا بَصَٰٓئِرُ لِلنَّاسِ وَهُدًى وَرَحْمَةٌ لِّقَوْمٍ يُوقِنُونَ ﴿٢٠﴾

Bini israa'iil wuxuu Alle siiyay waqtiyadii hore kitaabbo iyo in Nabiyo laga bixiyo, waxayse ku jawaabeen is khilaaf iyo xaq diiddo, xasad iyo isla wayni darteed, taasina ma aha waxay ku faani karaan gaalada yuhuud, maxaa yeeley Nabiyadu waxay ahaayeen muslimiin, waxaan isaga ahayn wax mataro. Saas darteed yuu Alle u faray Nabiga inuu ku toosnaado waddada xaqa ah iyo shareecada islaamka, oosan maqlin warka kuwaan wax ogayn, oon waxna u tarayn, sokeeye dadna wax ma tarto ee waxaa wax tari gargaarka Alle iyo xaq raacidda. **[Al-Jaathiyah: 16-20].**

21. Mise waxay u maleeyeen kuwii kasbaday xumaanta inaan ka yeeleyno kuwa xaqa rumeeyey ee camal fiican falay oo kale, nolol iyo geeriba, waxaa xun waxay xukumi.

أَمْ حَسِبَ ٱلَّذِينَ ٱجْتَرَحُوا۟ ٱلسَّيِّـَٔاتِ أَن نَّجْعَلَهُمْ كَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ سَوَآءً مَّحْيَاهُمْ وَمَمَاتُهُمْ ۚ سَآءَ مَا يَحْكُمُونَ ﴿٢١﴾

22. Alle ayaa u abuuray samooyinka iyo dhulka, xaq iyo in laga abaalmariyo naf walba waxay kasbatay, lamana dulmiyo.

وَخَلَقَ ٱللَّهُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ بِٱلْحَقِّ وَلِتُجْزَىٰ كُلُّ نَفْسٍۭ بِمَا كَسَبَتْ وَهُمْ لَا يُظْلَمُونَ ﴿٢٢﴾

23. Ka warran ruux ka yeeshay ilaahiisa hawadiisa, oo Alle dhumiyey isagoo cilmi leh, (xujaduna ku oogantay) oo daboolay maqalkiisa iyo qalbigiisa, yeelayna araggiisa dabool, yaa hanuunin Alle kadib, miyaydaan wax xusuusanayn.

أَفَرَءَيْتَ مَنِ ٱتَّخَذَ إِلَٰهَهُۥ هَوَىٰهُ وَأَضَلَّهُ ٱللَّهُ عَلَىٰ عِلْمٍ وَخَتَمَ عَلَىٰ سَمْعِهِۦ وَقَلْبِهِۦ وَجَعَلَ عَلَىٰ بَصَرِهِۦ غِشَٰوَةً فَمَن يَهْدِيهِ مِنۢ بَعْدِ ٱللَّهِ ۚ أَفَلَا تَذَكَّرُونَ ﴿٢٣﴾

24. Waxay dheheen gaaladii wax kale ma jiro ee waa uun nolashannada dhaw, waana dhimaneynaa qaarna noolaan, waxaan waqtiga ahaynna nama dilo, wax ogaansho ahna uma leh arrintaas, waxaan male ahaynna kuma socdaan.

وَقَالُوا۟ مَا هِىَ إِلَّا حَيَاتُنَا ٱلدُّنْيَا نَمُوتُ وَنَحْيَا وَمَا يُهْلِكُنَآ إِلَّا ٱلدَّهْرُ ۚ وَمَا لَهُم بِذَٰلِكَ مِنْ عِلْمٍ ۖ إِنْ هُمْ إِلَّا يَظُنُّونَ ﴿٢٤﴾

25. Marka lagu akhriyo korkooda aayaadkannaga oo cad cad wax xuja ah ma helaan oon ahayn noo keena aabbayowganno haddaad run sheegaysaan.

وَإِذَا تُتْلَىٰ عَلَيْهِمْ ءَايَٰتُنَا بَيِّنَٰتٍ مَّا كَانَ حُجَّتَهُمْ إِلَّآ أَن قَالُوا۟ ٱئْتُوا۟ بِـَٔابَآئِنَآ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٢٥﴾

26. Waxaad dhahdaa Alle ayaa idin nooleeya idinna dili, idinna kulmin maalinta qiyaame, shakina ma leh, laakiin dadka badankiis ma oga.

قُلِ ٱللَّهُ يُحْيِيكُمْ ثُمَّ يُمِيتُكُمْ ثُمَّ يَجْمَعُكُمْ إِلَىٰ يَوْمِ ٱلْقِيَٰمَةِ لَا رَيْبَ فِيهِ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٢٦﴾

Samafale iyo xumaanfale isku mid Alle kama dhigo nolol iyo geeri midna, Alle na wuxuu u abuuray samada iyo dhulka xaq iyo inuu abaalmariyo naf walba, cid hawadeeda raacday oo dhuntay iyadoo cilmi (ku sugan oo xujadi ku oogantay), oo dhago, qalbi, iyo arag beelay cidna ma hanuuniso, gaalada caqliga xun oo lagu magacaabi jiray dahriyiin haddana lagu magacaabo shuuciyiin waxay sheegeen in waqtigu uun dili, waxse ma oga ee Alle ayaa wax dila, waxna nooleeya, qiyaamaana la hor tagi, cid walbana Alle ayaa abaal marin. **[Al-Jaathiyah: 21-26].**

27. Alle ayaa iska leh xukunka samooyinka iyo dhulka, maalintay kacdo saacadda

وَلِلَّهِ مُلْكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ وَيَوْمَ تَقُومُ ٱلسَّاعَةُ يَوْمَئِذٍ يَخْسَرُ ٱلْمُبْطِلُونَ ﴿٢٧﴾

qiyaame maalintaasay khasaari xumaanlowgu.

28. Waxaadna arki ummad kasta iyadoo lawyaha ku fadhida qiyaamada, ummad kastana waxaa loogu yeedhi kitaabkii «camalkeeda» maalintaas waxaa laydiinka abaalmarin waxaad camal faleyseen.

وَتَرَىٰ كُلَّ أُمَّةٍ جَاثِيَةً ۚ كُلُّ أُمَّةٍ تُدْعَىٰ إِلَىٰ كِتَابِهَا ۖ الْيَوْمَ تُجْزَوْنَ مَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٢٨﴾

29. Kani waa kitaabkannagii wuxuuna ku hadli xaq korkiinna, annaguna waan qoraynay waxaad camal falaysaan.

هَٰذَا كِتَابُنَا يَنطِقُ عَلَيْكُم بِالْحَقِّ ۚ إِنَّا كُنَّا نَسْتَنسِخُ مَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٢٩﴾

30. Kuwa xaqa rumeeyey oo camal fiican falay wuxuu galin Rabbigood naxariistiisa, taasina waa liibaan wayn.

فَأَمَّا الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ فَيُدْخِلُهُمْ رَبُّهُمْ فِي رَحْمَتِهِ ۚ ذَٰلِكَ هُوَ الْفَوْزُ الْمُبِينُ ﴿٣٠﴾

31. Kuwa gaaloobayse waxaa lagu dhihi miyeyna ahayn aayaadkeyga kuwa korkiinna lagu akhriyo ood iskibriseen noqoteenna qoom dambi falayaal ah.

وَأَمَّا الَّذِينَ كَفَرُوا أَفَلَمْ تَكُنْ آيَاتِي تُتْلَىٰ عَلَيْكُمْ فَاسْتَكْبَرْتُمْ وَكُنتُمْ قَوْمًا مُّجْرِمِينَ ﴿٣١﴾

32. Marka la dhaho yabooha Alle waa xaq, saacadda (qiyaamana) shaki ma leh, waxaad dhahdaan ma naqaan saacadda (qiyaame) waannu uun malayn mase yaqiinsanin.

وَإِذَا قِيلَ إِنَّ وَعْدَ اللَّهِ حَقٌّ وَالسَّاعَةُ لَا رَيْبَ فِيهَا قُلْتُم مَّا نَدْرِي مَا السَّاعَةُ إِن نَّظُنُّ إِلَّا ظَنًّا وَمَا نَحْنُ بِمُسْتَيْقِنِينَ ﴿٣٢﴾

Xukunka samada iyo dhulka iyo khalqiga dhammaantiis Alle ayaa iska leh, maalinta qiyaamana waxaa khasaari xumaanloow, cid walbana waxaa la arki iyadoo ku fadhida jilbaha, oo qaadan kitaabkii camalkeeda, xadiith mursal ahna waxaa laga wariyey Nabiga inuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): «waxaad mooddaa inaan arko idinkoo jilbaha ku fadhiya taag ka sokeeya jahannamo». Kitaabka Alle na xaq buu ku hadli, kuwa fiicanna naxariista Alle ayay heli iyo liibaantiisa, kuwa xunna waxay mudan abaalmarin daran, maxaa yeeley way iskibriyeen xaqiina way beeniyeen waxna ma rumeynin. **[Al-Jaathiyah: 27-32].**

33. Waxaa u muuqan gaalada xumaantay camalfaleen (ciqaabteedi) waxaana koobi waxay ku jees jeesi jireen (ciqaabtiisii).

وَبَدَا لَهُمْ سَيِّـَٔاتُ مَا عَمِلُوا۟ وَحَاقَ بِهِم مَّا كَانُوا۟ بِهِۦ يَسْتَهْزِءُونَ ﴿٣٣﴾

34. Waxaana loo dhihi maanta (qiyaamada) waannu idinka tagi (idinkoo cadaaban) sidaad u halmaanteen la kulanka maalintiinnan, hooygiinnuna waa naar wax idiin gargaarana ma jiro.

وَقِيلَ ٱلْيَوْمَ نَنسَىٰكُمْ كَمَا نَسِيتُمْ لِقَآءَ يَوْمِكُمْ هَٰذَا وَمَأْوَىٰكُمُ ٱلنَّارُ وَمَا لَكُم مِّن نَّٰصِرِينَ ﴿٣٤﴾

35. Arrintaasna waxaa ugu wacan inaad ka yeelateen aayaadka Alle jees jees, idinna dhagartay nolosha dhaw (ee adduun) maanta qiyaamada lagama bixiyo naarta, cudurdaarna lama warsado.

ذَٰلِكُم بِأَنَّكُمُ ٱتَّخَذْتُمْ ءَايَٰتِ ٱللَّهِ هُزُوًا وَغَرَّتْكُمُ ٱلْحَيَوٰةُ ٱلدُّنْيَا ۚ فَٱلْيَوْمَ لَا يُخْرَجُونَ مِنْهَا وَلَا هُمْ يُسْتَعْتَبُونَ ﴿٣٥﴾

36. Mahad Alle ayaa iskaleh Rabbiga samooyinka iyo dhulka, Rabbiga caalamkana ah.

فَلِلَّهِ ٱلْحَمْدُ رَبِّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَرَبِّ ٱلْأَرْضِ رَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٣٦﴾

37. Waxaana u sugnaatay waynida samooyinka iyo dhulka dhexdiisa, waana adkaade falsan.

وَلَهُ ٱلْكِبْرِيَآءُ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۖ وَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿٣٧﴾

Xumaanta ciqaabteeda waa la arki, maalinta abaalmarintana waxaa lagaga tagi xumaanle oo dhan naar daran siduu u halmaamay xaqa, gargaarna ma helo, illeen adduunyaa waashaye, lagamana saaro naarta, cudurdaarna lama warsado, mahad, weyni, xukun iyo tasarrufna waxaa iska leh maalintaas qiyaame iyo had iyo jeerba Rabbiga caalamka ee wax walba ahaysiiyey, una ahaan doono. Waxaa sugnaatay in Alle ku dhihi addoommadiisa qaar (qiyaamada) miyaan kuu guurinnin, miyaannaan ku sharfin, miyaannaan kuu sahlin waxaad korto sida fardaha iyo geela, miyaanaan madax kaa dhigin oodan xukumin, wuxuuna dhahaa dhab ahaan waad yeeshay, wuxuuna dhahaa Alle ma waxaad u malaysay inaadan nala kulmiheyn, wuxuuna dhahaa maya, markaasuu Alle dhahaa: maanta waxaa lagugu dayn sidaad ii halmaantay. **[Al-Jaathiyah: 33-37].**

Suurat Al-Axqaaf

سُورَةُ الْأَحْقَافِ

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

حمٓ ﴿١﴾

تَنزِيلُ ٱلْكِتَٰبِ مِنَ ٱللَّهِ ٱلْعَزِيزِ ٱلْحَكِيمِ ﴿٢﴾

مَا خَلَقْنَا ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَآ إِلَّا بِٱلْحَقِّ وَأَجَلٍ مُّسَمًّىۚ وَٱلَّذِينَ كَفَرُواْ عَمَّآ أُنذِرُواْ مُعْرِضُونَ ﴿٣﴾

قُلْ أَرَءَيْتُم مَّا تَدْعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ أَرُونِى مَاذَا خَلَقُواْ مِنَ ٱلْأَرْضِ أَمْ لَهُمْ شِرْكٌ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِۖ ٱئْتُونِى بِكِتَٰبٍ مِّن قَبْلِ هَٰذَآ أَوْ أَثَٰرَةٍ مِّنْ عِلْمٍ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٤﴾

وَمَنْ أَضَلُّ مِمَّن يَدْعُواْ مِن دُونِ ٱللَّهِ مَن لَّا يَسْتَجِيبُ لَهُۥٓ إِلَىٰ يَوْمِ ٱلْقِيَٰمَةِ وَهُمْ عَن دُعَآئِهِمْ غَٰفِلُونَ ﴿٥﴾

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

1. Waxay ku tusin mucjisada quraanka ee wayn, Alle ayaa ogna waa la dhahaa.
2. Kitaabka (quraanka) ah wuxuu ka soo dagay Allaha adkaada ee falka san xaggiisa.
3. Samaawaadka iyo dhulka iyo waxa u dhexeeyana waxaan xaq iyo muddo magacaaban ahayn uma aannaan abuurin, kuwii gaaloobayna wixii loogu digay (ee quraanka) ah way ka jeedsadeen.
4. Waxaad dhahdaa Nabiyoow bal ka warrama waxaad caabudaysaan ee Alle ka soo hadhay ina tusiya waxay abuureen oo dhulka ah, mise shirkad ayay ku leeyihiin samaawaadka, ii keena (oo i tusiya) kitaab quraanka, ka horreeyay, ama wax raad cilmi ah, haddaad run sheegeeysaan.
5. Wax ka dulmi badan ma jiro ruux baryi Alle ka sokow waxaan ajiibeynin (maqleyn) tan iyo qiyaamada, baryadoodana halmaansan (ogeyn).

6. Marka dadka la soo kulmiyana u noqon doona kuwii caabudi jiray col, inay caabudi jireenna dafiri.

وَإِذَا حُشِرَ ٱلنَّاسُ كَانُوا۟ لَهُمْ أَعْدَآءً وَكَانُوا۟ بِعِبَادَتِهِمْ كَٰفِرِينَ ﴿٦﴾

Quraanka Alleheenna wayn yaa soo dajiyay, cirka, dhulka iyo khalqiga kale ee badanba Alle ayaa abuuray, si ruux walba looga abaal mariyo wuxuu camal falay muddaduu noolaa, wax Alle la wadaaga milkigiisa iyo awooddiisana ma jiro, wax in lala caabudo ama lala baryana ma bannaana, xaqna ma aha, ruuxa waxaan Alle ahayn caabuda ama baryana maalinta qiyaame ee kulanka wax uma taro, wuuna dafiraa. **[Al-Axqaaf: 1-6].**

7. Marka gaalada lagu dul akhriyo aayaadkannaga (quraanka) oo cad waxay dhahaan kuwa gaalada ah markuu u yimid xaqu kani waa sixir cad.

وَإِذَا تُتْلَىٰ عَلَيْهِمْ ءَايَٰتُنَا بَيِّنَٰتٍ قَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ لِلْحَقِّ لَمَّا جَآءَهُمْ هَٰذَا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿٧﴾

8. Waxay dhihi waa been uu abuurtay (Nabigu), waxaad dhahdaa haddaan been abuurto waxba iigama taraysaan Alle xaggiisa, isagaana og waxaad dhumbanaysaan (oo been ah), Alle ayaana marag ugu filan dhexdeenna, waana dambi dhaafe naxariista ah.

أَمْ يَقُولُونَ ٱفْتَرَىٰهُ ۖ قُلْ إِنِ ٱفْتَرَيْتُهُۥ فَلَا تَمْلِكُونَ لِى مِنَ ٱللَّهِ شَيْـًٔا ۖ هُوَ أَعْلَمُ بِمَا تُفِيضُونَ فِيهِ ۚ كَفَىٰ بِهِۦ شَهِيدًۢا بَيْنِى وَبَيْنَكُمْ ۖ وَهُوَ ٱلْغَفُورُ ٱلرَّحِيمُ ﴿٨﴾

9. Waxaad dhahdaa ma ihi kii ugu horreeyay rasuullada, mana ogi waxa lagu fali aniga iyo idinka, waxaan uun raaci waxa lay waxyoodo (ee quraanka ah) waxaana ahay u dige cad (oo muuqda).

قُلْ مَا كُنتُ بِدْعًا مِّنَ ٱلرُّسُلِ وَمَآ أَدْرِى مَا يُفْعَلُ بِى وَلَا بِكُمْ ۖ إِنْ أَتَّبِعُ إِلَّا مَا يُوحَىٰٓ إِلَىَّ وَمَآ أَنَا۠ إِلَّا نَذِيرٌ مُّبِينٌ ﴿٩﴾

10. Waxaad dhahdaa bal ii warrama hadduu quraanku Alle ka soo dagay ood ka gaalowdaan oo uu ka marag furo marag ree banii'israa'iil ah isaga oo kale (xaqnimada iyo runta) oo uu

قُلْ أَرَءَيْتُمْ إِن كَانَ مِنْ عِندِ ٱللَّهِ وَكَفَرْتُم بِهِۦ وَشَهِدَ شَاهِدٌ مِّنۢ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ عَلَىٰ مِثْلِهِۦ فَـَٔامَنَ وَٱسْتَكْبَرْتُمْ ۖ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿١٠﴾

rumeeyay idinkuna aad is kibriseen, Alle na ma hanuuniyo kuwa dulmilowga ah.

Quraanku waa xaq sugan oo Alle u soo dhiibay, malakujibriil, kuna soo dajiyay Nabiga Muxammad ah (ammaan iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee). Mana aha wararkii dadkii hore oo la soo uruuriyay, siday gaalada xaq diidayaasha ah sheegteen, sixirna ma aha iyo wax la been abuurtay, Nabiguna jeebkiisa kama keenin, siduu Allaba aayada badan ku caddeeyay, maragna waxaa ugu filan Nabiga Allaha wayn ee naxariista badan, Nabiguna wax gaar ah oo hor leh oon toosnayn lama imaannin, ee wuxuu raaci wixii Alle u waxyooday. Waxaa quraanka u marag furay oo rumeeyay culimo ka mid ah ree banii israaiil, siday u rumeeyeen kitaabkoodii, inkastood idinku ka gaalowdeen isna kibriseen. **[Al-Axqaaf: 7-10].**

وَقَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لِلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَوۡ كَانَ خَيۡرٗا مَّا سَبَقُونَآ إِلَيۡهِۚ وَإِذۡ لَمۡ يَهۡتَدُواْ بِهِۦ فَسَيَقُولُونَ هَٰذَآ إِفۡكٞ قَدِيمٞ ١١

11. Gaaladii waxay dheheen hadduu quraanku khayr yahay mu'miniintu noogama hormareen rumayntiisa, maadaama aanay ku hanuunin quraankan yay gaaladu dhihi kan (quraanka) waa beenihii hore.

وَمِن قَبۡلِهِۦ كِتَٰبُ مُوسَىٰٓ إِمَامٗا وَرَحۡمَةٗۚ وَهَٰذَا كِتَٰبٞ مُّصَدِّقٞ لِّسَانًا عَرَبِيّٗا لِّيُنذِرَ ٱلَّذِينَ ظَلَمُواْ وَبُشۡرَىٰ لِلۡمُحۡسِنِينَ ١٢

12. Quraanka waxaa ka horreeyay kitaabkii (Nabi) Muuse, isagoo ah hanuuniye iyo naxariis, kanna waa kitaab u rumayn (xaqa), af carabina ku soo dagay, si uu ugu digo kuwa dulmiga falay, uguna bishaareeyo kuwa wanaagga falay.

إِنَّ ٱلَّذِينَ قَالُواْ رَبُّنَا ٱللَّهُ ثُمَّ ٱسۡتَقَٰمُواْ فَلَا خَوۡفٌ عَلَيۡهِمۡ وَلَا هُمۡ يَحۡزَنُونَ ١٣

13. Kuwa yidhi Rabbigeen waa Alle haddana toosnaaday cabsi iyo murugi midna ma arkaan.

أُوْلَٰٓئِكَ أَصۡحَٰبُ ٱلۡجَنَّةِ خَٰلِدِينَ فِيهَا جَزَآءَۢ بِمَا كَانُواْ يَعۡمَلُونَ ١٤

14. Kuwaasna waa ehlujanno wayna ku waari dhexdeeda, abaalmarin camalkoodii (wanaagsanaa) darteed.

Xaqa rumayntiisa ruuxna gaar uma aha, ee ciddii Alle waafajiyo oo hanuunka doonta yaa hanuuna, sida ay gaaladu dheheenna xaalku ma aha, oo ah in ruuxa xoolaha badan ama madaxda ah uu ku xaq leeyahay inuu wax walba ugu horreeyo, xataa hanuunkaba. Quraankuna ma aha kii ugu horreeyay kutubta Alle ee waxaa hortiisa ahaa tawreeddii Nabi Muuse ee wanaagsanayd, iyo kutubihii kale ee Alle, quraankuna wuxuu ku soo dagay luqada carabiga ah si uu ugu digo kuwa leexday, uguna bishaareeyo kuwa wanaagga fala, ruuxiise Alle aqoonsada haddana toosnaada cabsi iyo murugo midna ma qabato maalinta qiyaame, jannana wuu gali isagoo ku waari camalkiisa wanaagsan dartiis. **[Al-Axqaaf: 11-14].**

وَوَصَّيْنَا ٱلْإِنسَٰنَ بِوَٰلِدَيْهِ إِحْسَٰنًا ۖ حَمَلَتْهُ أُمُّهُۥ كُرْهًا وَوَضَعَتْهُ كُرْهًا ۖ وَحَمْلُهُۥ وَفِصَٰلُهُۥ ثَلَٰثُونَ شَهْرًا ۚ حَتَّىٰٓ إِذَا بَلَغَ أَشُدَّهُۥ وَبَلَغَ أَرْبَعِينَ سَنَةً قَالَ رَبِّ أَوْزِعْنِىٓ أَنْ أَشْكُرَ نِعْمَتَكَ ٱلَّتِىٓ أَنْعَمْتَ عَلَىَّ وَعَلَىٰ وَٰلِدَىَّ وَأَنْ أَعْمَلَ صَٰلِحًا تَرْضَىٰهُ وَأَصْلِحْ لِى فِى ذُرِّيَّتِىٓ ۖ إِنِّى تُبْتُ إِلَيْكَ وَإِنِّى مِنَ ٱلْمُسْلِمِينَ ﴿١٥﴾

15. Dadka waxaan u dardaarannay labadiisii waalid inuu u wanaag falo, hooyadiis uurkay ku sidday iyadoo dhibban wayna dhashay iyadoo dhibban, uurkiisa iyo gudhintiisuna waa soddon bilood, markuu ilmihii tabar yeesho oo afartan gaadho yuu (kan fiican) dhahaa: Rabbow igu toosi inaan kugu mahadiyo nicmadaada aad iigu nicmaysay aniga iyo waaliddiintay, iguna toosi inaan camal fiican ood ka raalli tahay falo, iina wanaaji faracayga, waana kuu toobadkeenaye, waxaana ka mid ahay muslimiinta.

أُو۟لَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ نَتَقَبَّلُ عَنْهُمْ أَحْسَنَ مَا عَمِلُوا۟ وَنَتَجَاوَزُ عَن سَيِّـَٔاتِهِمْ فِىٓ أَصْحَٰبِ ٱلْجَنَّةِ ۖ وَعْدَ ٱلصِّدْقِ ٱلَّذِى كَانُوا۟ يُوعَدُونَ ﴿١٦﴾

16. Kuwaasi waa kuwaannu ka aqblayno camalkoodi fiicnaa, kana dhaafayno koodii xumaa, waxayna noqon ehelu-janno, Alle na wuxuu u yaboohay yabooh run ah.

Waalidka xaqiisu aad buu u wayn yahay, Alle na in badan yuu quraanka ku soo celceliyay sida aayadahan oo kale, meelo badanna wuxuu Alle la xidhiidhiyay cibaadadiisa, si gaar ahna wuxuu u xusay hooyada, maxaa yeelay waxay la kulantaa dhib badan xagga uurka iyo xagga dhalmada iyo nuujintaba, saas

daraaddeed ilmaha wanaagsan wuu u sama falaa, isagoo Alle warsan inuu waafajiyo mahaddiisa, siduu ugu sama falay isaga iyo waalidkiisba, una fududeeyo inuu camal fiican falo, faraciisana u suubbiyo, ruuxa saas yeelana waa midka Alle wanaagga ka aqbalo, xumaantana ka dhaafo janno iyo wanaagna ku abaal mariyo. **[Al-Axqaaf: 15-16].**

17. Waxaa jira mid ku dhihi labadiisii waalid uf baa la idin yidhi ee ma waxaad ii yaboohaysaan in la i soo bixin iyadoo dadkii horaba tagay, labada waalidna ay Alle uga baryi (hanuun), iyagoo ku dhihi magacaa ba'ee rumee, ballanqaadka Alle na waa xaqe, oo markaas ku dhihi waxaasi waa beentii dadkii hore.

وَٱلَّذِى قَالَ لِوَٰلِدَيْهِ أُفٍّ لَّكُمَآ أَتَعِدَانِنِىٓ أَنْ أُخْرَجَ وَقَدْ خَلَتِ ٱلْقُرُونُ مِن قَبْلِى وَهُمَا يَسْتَغِيثَانِ ٱللَّهَ وَيْلَكَ ءَامِنْ إِنَّ وَعْدَ ٱللَّهِ حَقٌّ فَيَقُولُ مَا هَٰذَآ إِلَّآ أَسَٰطِيرُ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿١٧﴾

18. Kuwaasi waa kuwa caddibaadi u sugnaatay, iyagoo ka mid noqon kuwii horay u tagey oo jinni iyo insiba leh, waxayna ahaayeen kuwa khasaaray.

أُو۟لَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ حَقَّ عَلَيْهِمُ ٱلْقَوْلُ فِىٓ أُمَمٍ قَدْ خَلَتْ مِن قَبْلِهِم مِّنَ ٱلْجِنِّ وَٱلْإِنسِ ۖ إِنَّهُمْ كَانُوا۟ خَٰسِرِينَ ﴿١٨﴾

19. Cid walba waxay mudan waxay camal fashay Alle na wuu u oofin camalkooda iyagoon la dulmiyaynin.

وَلِكُلٍّ دَرَجَٰتٌ مِّمَّا عَمِلُوا۟ ۖ وَلِيُوَفِّيَهُمْ أَعْمَٰلَهُمْ وَهُمْ لَا يُظْلَمُونَ ﴿١٩﴾

Waalidka xaqiisa waxaa sheegay aayado badan, waxaana inoo soo hor maray ilmihii baarriga u ahaa waalidkii xaalkiisa, aayadahanna waxay caddayn xumaanta caaqnimada iyo caasiyidda waalidka, iyo in ruuxii waalidkiis caasiya, xumaan, Alle khilaafid, qiyaamo inkirid iyo baadinnimoba uu u dhaw yahay, kuwa saas yeelana waa kuwa naartu u waajibtay oo khasaarana ku dhacay, illeen ruux walba Alle wuxuu ka abaal marin wuxuu camal falay wanaag iyo xumaanba. **[Al-Axqaaf: 17-19].**

20. (Xusuuso) maalinta kuwii gaaloobay loo bandhigi naarta, iyagoo lagu dhihi waxaad wanaaggiinnii ku dhammaysateen noloshiinnii

وَيَوْمَ يُعْرَضُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ عَلَى ٱلنَّارِ أَذْهَبْتُمْ طَيِّبَٰتِكُمْ فِى حَيَاتِكُمُ ٱلدُّنْيَا وَٱسْتَمْتَعْتُم بِهَا ۖ فَٱلْيَوْمَ تُجْزَوْنَ

dhawayd, waadna ku raaxaysateen, maantase waxaa laydinku abaal marin caddibaad dulli ah; iskibrintiinii aad xaq darro isula weeyneeydeen iyo faasiqnimadiinna darteed.

عَذَابَ ٱلْهُونِ بِمَا كُنتُمْ تَسْتَكْبِرُونَ فِى ٱلْأَرْضِ بِغَيْرِ ٱلْحَقِّ وَبِمَا كُنتُمْ تَفْسُقُونَ ﴿٢٠﴾

21. Xusuuso ree Caad walaalkood (Nabi Huud) markuu u digay qoomkiisii iyagoo daggan Axqaaf, iyagoo rasuullo wax u diga ka horreeyeen kana dambeeyeen, isagoo ku dhihi: Allaah mooyee wax kale ha caabudina, waxaan idiinka yaabi caddibaad maalin wayn.

* وَٱذْكُرْ أَخَا عَادٍ إِذْ أَنذَرَ قَوْمَهُۥ بِٱلْأَحْقَافِ وَقَدْ خَلَتِ ٱلنُّذُرُ مِنۢ بَيْنِ يَدَيْهِ وَمِنْ خَلْفِهِۦٓ أَلَّا تَعْبُدُوٓا۟ إِلَّا ٱللَّهَ إِنِّىٓ أَخَافُ عَلَيْكُمْ عَذَابَ يَوْمٍ عَظِيمٍ ﴿٢١﴾

22. Waxay ku dheheen ma waxaad noola timid inaad naga iisho ilaahyadannada, noo keen waxaad noogu goodiyayso haddaad run sheegeyso.

قَالُوٓا۟ أَجِئْتَنَا لِتَأْفِكَنَا عَنْ ءَالِهَتِنَا فَأْتِنَا بِمَا تَعِدُنَآ إِن كُنتَ مِنَ ٱلصَّٰدِقِينَ ﴿٢٢﴾

23. Wuxuuna ku yidhi Alle ayaa ku cilmi leh (goorta caddibaaddiinna) ee anugu waxaan idin gaadhsiin waxa lay faray inaan gaadhsiiyo, waxaanse idinku arkaa kuwa jaahiliin ah.

قَالَ إِنَّمَا ٱلْعِلْمُ عِندَ ٱللَّهِ وَأُبَلِّغُكُم مَّآ أُرْسِلْتُ بِهِۦ وَلَٰكِنِّىٓ أَرَىٰكُمْ قَوْمًا تَجْهَلُونَ ﴿٢٣﴾

Raaxo adduun oo caddibaadi ka dambayso wax ma tarto, ruuxiise gaalnimo, kibir iyo xaq diidnimo ku kaca waxaa lagu abaalmarin aakhiro caddibaad. Aayadaha kale waxay ka qisoon qoom la dhihi jiray ree Caad oo loo diray Nabi Huud, beeniyeenna markuu xaqa ugu yeedhay iyo in Alle kaliya ay caabudaan, kana digtoonaadaan caddibaad daran, wayse madax adaygeen, waxayna u caddeeyeen inayan marna ilaahyaalkooda ka tagaynin, ee wuxuu keeni ha keeno, Alle ayaase wax walba og awoodna leh, hadalladaas oo kalana waxaa ku hadla jaahiliinta isla wayn. **[Al-Axqaaf: 20-23].**

24. Markay gaaladii reer Caad arkeen caddibaaddii (sida daruur) oo dooxooyinkooda soo qaabishay waxay dheheen waa daruur na waraabinaysa, ma aha ee waa waxaad dadajisanayseen inuu yimaaddo oo caddibaad ah, waana dabayl caddibaad darani ku jirto.

فَلَمَّا رَأَوْهُ عَارِضًا مُّسْتَقْبِلَ أَوْدِيَتِهِمْ قَالُوا۟ هَٰذَا عَارِضٌ مُّمْطِرُنَا ۚ بَلْ هُوَ مَا ٱسْتَعْجَلْتُم بِهِۦ ۖ رِيحٌ فِيهَا عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٢٤﴾

25. Wax kasta oy martana way burburin amarka Alle dartiis, markaasay ahaadeen kuwa aan la arkaynin guryohoodii mooyee, saasaanna ku abaal marinnaa kuwa dambiilayaasha ah.

تُدَمِّرُ كُلَّ شَىْءٍۭ بِأَمْرِ رَبِّهَا فَأَصْبَحُوا۟ لَا يُرَىٰٓ إِلَّا مَسَٰكِنُهُمْ ۚ كَذَٰلِكَ نَجْزِى ٱلْقَوْمَ ٱلْمُجْرِمِينَ ﴿٢٥﴾

26. Waxaan makaninnay (siinnay) ree Caad wax aannaan idin makaninnin, waxaanna u yeellay maqal, arag iyo quluub, waxbase uma tarin maqalkoodii, araggoodii iyo quluubtoodii, maxaa yeelay waxay diidayeen aayaadka Alle, waxaana ku dhacay (oo koobay) caddibaadii ay ku jeesjeesayeen.

وَلَقَدْ مَكَّنَّٰهُمْ فِيمَآ إِن مَّكَّنَّٰكُمْ فِيهِ وَجَعَلْنَا لَهُمْ سَمْعًا وَأَبْصَٰرًا وَأَفْـِٔدَةً فَمَآ أَغْنَىٰ عَنْهُمْ سَمْعُهُمْ وَلَآ أَبْصَٰرُهُمْ وَلَآ أَفْـِٔدَتُهُم مِّن شَىْءٍ إِذْ كَانُوا۟ يَجْحَدُونَ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ وَحَاقَ بِهِم مَّا كَانُوا۟ بِهِۦ يَسْتَهْزِءُونَ ﴿٢٦﴾

Gaaladii ree Caad way kibreen waxayna beeniyeen Nabigii Alle ee Huud ahaa, markaasaa Alle ku halaagay caddibaad dabayleed oo naari ku dhex jirto, iyagoo roob mooday dabayshaasoo baabi'isay halaagtayna, saas oo kalana waxaa mudan ciddii isla waynaata, oo gaalawda dhammaanteed, cid dhuntayna maqal, arag iyo qalbi wax uma taro, saas daraaddeed waa in lagu waana qaato qisadan, Alle na lagu xidhnaado illeen xoog iyo quwad cidna agtiisa wax uma tartee. **[Al-Axqaaf: 24-26].**

27. Waxaan halaagnay wixii gaarakiinna ahaa oo magaalooyin ah, xujooyinkana waan caddaynay si dadku Alle ugu noqdo.

وَلَقَدْ أَهْلَكْنَا مَا حَوْلَكُم مِّنَ ٱلْقُرَىٰ وَصَرَّفْنَا ٱلْـَٔايَٰتِ لَعَلَّهُمْ يَرْجِعُونَ ﴿٢٧﴾

فَلَوْلَا نَصَرَهُمُ ٱلَّذِينَ ٱتَّخَذُوا۟ مِن دُونِ ٱللَّهِ قُرْبَانًا ءَالِهَةً ۖ بَلْ ضَلُّوا۟ عَنْهُمْ ۚ وَذَٰلِكَ إِفْكُهُمْ وَمَا كَانُوا۟ يَفْتَرُونَ ﴿٢٨﴾

28. Maxay ugu gargaari waayeen kuway ilaahyaal ay Alle ugu dhawaadaan ka dhigteen Alle ka sokow, way ka dhumeen, taasina waa beentoodii iyo war abuurashadoodii.

وَإِذْ صَرَفْنَآ إِلَيْكَ نَفَرًا مِّنَ ٱلْجِنِّ يَسْتَمِعُونَ ٱلْقُرْءَانَ فَلَمَّا حَضَرُوهُ قَالُوٓا۟ أَنصِتُوا۟ ۖ فَلَمَّا قُضِىَ وَلَّوْا۟ إِلَىٰ قَوْمِهِم مُّنذِرِينَ ﴿٢٩﴾

29. Xusuuso markaan kuu soo iilnay koox jinni ah oo quraanka dhagaysan, markay yimaadeen (meesha lagu akhriyina) ay isu dheheen dhagaysta, markii la dhammeeyayna ay ciddoodii ku noqdeen iyagoo u digi.

قَالُوا۟ يَٰقَوْمَنَآ إِنَّا سَمِعْنَا كِتَٰبًا أُنزِلَ مِنۢ بَعْدِ مُوسَىٰ مُصَدِّقًا لِّمَا بَيْنَ يَدَيْهِ يَهْدِىٓ إِلَى ٱلْحَقِّ وَإِلَىٰ طَرِيقٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿٣٠﴾

30. Oo ku dhihi qoomkannow waxaan maqallay kitaab (quraan) la soo dajiyay (Nabi) Muuse ka dib oo rumayn kitaabihii ka horreeyey, kuna hanuunin xaq iyo waddada toosan.

يَٰقَوْمَنَآ أَجِيبُوا۟ دَاعِىَ ٱللَّهِ وَءَامِنُوا۟ بِهِۦ يَغْفِرْ لَكُم مِّن ذُنُوبِكُمْ وَيُجِرْكُم مِّنْ عَذَابٍ أَلِيمٍ ﴿٣١﴾

31. Qoomkannow ajiiba (raaca) uyeedhaha xaqa Alle, rumeeyana, dambigiinna Alle ha dhaafee, hana idinka koriyo caddibaad darane.

وَمَن لَّا يُجِبْ دَاعِىَ ٱللَّهِ فَلَيْسَ بِمُعْجِزٍ فِى ٱلْأَرْضِ وَلَيْسَ لَهُۥ مِن دُونِهِۦٓ أَوْلِيَآءُ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ فِى ضَلَٰلٍ مُّبِينٍ ﴿٣٢﴾

32. Ruuxaan ajiibin (raacin) uyeedhaha Alle kuma daaliyo Alle dhulka dhexdiisa (kama cararo) wax Alle ka soo hadhay oo u gargaarina ma jiro, kuwaas «aan maqlaynin yeedhidda Allena» waa kuwa baadi cad ku sugan.

Labada aayadood ee hore waxay ka warrami sida Alle u halaagay gaaladii kibirtay ee Maka ag dagnayd, ilaahyadoodii Alle ka soo hadhayna ayna wax u tarin, Ilaahayna saasuu u karaa inuu xaq diidayaasha u halaago. Aayadaha kale waxay ka qisoon in Nabiga Muxammad ah (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa

Alle ha yeelee) loo diray jinni iyo insiba, ayna koox jinni ah maqashay isagoo quraanka akhrin dhagaysteenna rumeeyeenna. **[Al-Axqaaf: 27-32].**

أَوَلَمْ يَرَوْا۟ أَنَّ ٱللَّهَ ٱلَّذِى خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ وَلَمْ يَعْىَ بِخَلْقِهِنَّ بِقَٰدِرٍ عَلَىٰٓ أَن يُحْۦِىَ ٱلْمَوْتَىٰ ۚ بَلَىٰٓ إِنَّهُۥ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿٣٣﴾

33. Miyeeyna ogayn Allaha abuuray samaawaadka iyo dhulka aan kana noogin abuurkooda inuu karo inuu soo nooleeyo wixii dhintay, saas ma aha, ee Alle wax walba wuu karaa.

وَيَوْمَ يُعْرَضُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ عَلَى ٱلنَّارِ أَلَيْسَ هَٰذَا بِٱلْحَقِّ ۖ قَالُوا۟ بَلَىٰ وَرَبِّنَا ۚ قَالَ فَذُوقُوا۟ ٱلْعَذَابَ بِمَا كُنتُمْ تَكْفُرُونَ ﴿٣٤﴾

34. Maalinta kuwii gaaloobay loo bandhigi naarta waxaa lagu odhan miyuuna xaq ahayn kan (caddibaadda ah) markaasay dhahaan Alle Ayaan ku dhaarannaye waa xaq, Alle wuxuu ku dhahaa dhadhamiya caddibaadda gaalnimadiinna darteed.

فَٱصْبِرْ كَمَا صَبَرَ أُو۟لُوا۟ ٱلْعَزْمِ مِنَ ٱلرُّسُلِ وَلَا تَسْتَعْجِل لَّهُمْ ۚ كَأَنَّهُمْ يَوْمَ يَرَوْنَ مَا يُوعَدُونَ لَمْ يَلْبَثُوٓا۟ إِلَّا سَاعَةً مِّن نَّهَارٍ ۚ بَلَٰغٌ ۚ فَهَلْ يُهْلَكُ إِلَّا ٱلْقَوْمُ ٱلْفَٰسِقُونَ ﴿٣٥﴾

35. U samir siday u samreen kuwii sugnaanta iyo niyadda u saaxiibka ahaa ee rasuullada ahaa, hana ku dagdagin in la caddibo waxay la mid noqon markay arkaan waxa loogu gooddiyay ineeyan ku nagaannin adduunka saacad maalin ah waxaan ahayn, quraankuna waa gaadhsiin, kuwa faasiqiinta ah umbaana la halaagaa.

Ilaaheen isagaa wax walba abuuray, wax daaliya ama cajis galiyana ma jiro, soo bixinta dadkuna way u fududdahay, maalinta gaalada naarta la horkeenana waxay qiran xumaantoodii ay ku faleen adduunka, waxaana lagu abaalmarin caddibaad, waxaase laga rabaa ruuxa muslimka ah sabir, adkaysi iyo xaq ku sugnaansho, sida Alle faray rasuulladiisuna ahaayeen, quraankuna waa digniin Alle iyo war cad iyo gaadhsiin caalamka oo dhan, inkastoo ruuxu ku raaxaysto adduunyada ama ku raagaba waxay la mid noqon isagoon ku nagaannin mudda yar mooyeene. **[Al-Axqaaf: 33-35].**

Suurat Muxammad

سُورَةُ مُحَمَّدٍ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Kuwii gaaloobay oo jidka Alle na ka leexiyay dadka, Alle waa buriyay camalkooda.

ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ وَصَدُّواْ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ أَضَلَّ أَعۡمَٰلَهُمۡ ١

2. Kuwa rumeeyay xaqase oo camal fiican falay oo rumeeyay quraanka lagu soo dajiyay (Nabiga) Muxammad ah ee xaqa ah Alle wuu asturi xumaantooda, xaalkoodana wuu wanaajin.

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ وَءَامَنُواْ بِمَا نُزِّلَ عَلَىٰ مُحَمَّدٖ وَهُوَ ٱلۡحَقُّ مِن رَّبِّهِمۡ كَفَّرَ عَنۡهُمۡ سَيِّـَٔاتِهِمۡ وَأَصۡلَحَ بَالَهُمۡ ٢

3. Saasna waxaa ugu wacan in kuwa gaaloobayna ay raaceen baadhil, kuwa rumeeyayna ay raaceen xaqa Alle, saasuuna Alle u yeelaa tusaale.

ذَٰلِكَ بِأَنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ ٱتَّبَعُواْ ٱلۡبَٰطِلَ وَأَنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱتَّبَعُواْ ٱلۡحَقَّ مِن رَّبِّهِمۡۚ كَذَٰلِكَ يَضۡرِبُ ٱللَّهُ لِلنَّاسِ أَمۡثَٰلَهُمۡ ٣

4. Haddaad kula kulantaan gaalada dagaal luqunta ka garaaca, markaad sugtaanna ku adkeeya xidhidda, markaas ama iska sii daaya ama ha is furteen, inta dagaalku ka xasili, xaalku waa saas, hadduu Alle doonana wuu ka aarsan karaa, hase yeeshee wuxuu saas u falay inuu qaarkiin qaarka kale ku imtixaano, kuwa jidka Alle lagu dilana camalkooda Alle ma halleeyo.

فَإِذَا لَقِيتُمُ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ فَضَرۡبَ ٱلرِّقَابِ حَتَّىٰٓ إِذَآ أَثۡخَنتُمُوهُمۡ فَشُدُّواْ ٱلۡوَثَاقَ فَإِمَّا مَنَّۢا بَعۡدُ وَإِمَّا فِدَآءً حَتَّىٰ تَضَعَ ٱلۡحَرۡبُ أَوۡزَارَهَاۚ ذَٰلِكَ وَلَوۡ يَشَآءُ ٱللَّهُ لَٱنتَصَرَ مِنۡهُمۡ وَلَٰكِن لِّيَبۡلُوَاْ بَعۡضَكُم بِبَعۡضٖۗ وَٱلَّذِينَ قُتِلُواْ فِي سَبِيلِ ٱللَّهِ فَلَن يُضِلَّ أَعۡمَٰلَهُمۡ ٤

5. Alle na wuu toosin oo hanuunin kuwaas, wuuna wanaajin xaalkooda.

سَيَهْدِيهِمْ وَيُصْلِحُ بَالَهُمْ ﴿٥﴾

6. Wuxuuna galin janno (uu baray) u caddeeyay.

وَيُدْخِلُهُمُ ٱلْجَنَّةَ عَرَّفَهَا لَهُمْ ﴿٦﴾

Gaaladii Nabiga ka gaalowday xaqana dadka u diidday camlkoodu wuu buri, sida kuwa Nabiga rumeeya camal fiicanna fala dambigooda loo dhaafo, maxaa yeelay isku mid ma noqon karaan ruux xaqa raacay oo dadka faray iyo mid gaaloobay dadkana xaqa ka reebay, tan kale wuxuu Alle farayaa mu'miniinta inay ku jihaadaan jidka Alle, gaaladana isaga caabbiyaan si daran, jahaadkuna waa imtixaan Alle, ciddii ku dhimatana waa ehlu-janno hadii kalana waxay heli guul iyo sharaf, saas daraaddeed yaa ciddii jahaadka ka tagta dulli iyo gumaysi u dulfuulaa. **[Muxammad: 1-6].**

7. Kuwa xaqa rumeeyow haddaad u gargaartaan Alle (diintiisa) isna wuu idiin gargaari, gommadihiinnana wuu sugi (geesinnimo).

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِن تَنصُرُواْ ٱللَّهَ يَنصُرْكُمْ وَيُثَبِّتْ أَقْدَامَكُمْ ﴿٧﴾

8. Kuwa gaaloobayse halaag iyo (hoosu dhac) yaa u sugnaaday, camalkoodiina Alle wuu halleeyay.

وَٱلَّذِينَ كَفَرُواْ فَتَعْسًا لَّهُمْ وَأَضَلَّ أَعْمَـٰلَهُمْ ﴿٨﴾

9. Saas waxaa ugu wacan inay neceen waxa Alle soo dajiyay oo xaqa ah, markaasuu hoobiyay camlkoodii.

ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ كَرِهُواْ مَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ فَأَحْبَطَ أَعْمَـٰلَهُمْ ﴿٩﴾

10. Miyayna ku soconnin dhulka oo markaas ay arkaan siday noqotay cidhibtii kuwii gaaloobay ee ree maka ka horreeyay, Alle ayaa halaagay, gaaladana waxaa u sugnaaday saasoo kale halaag.

* أَفَلَمْ يَسِيرُواْ فِى ٱلْأَرْضِ فَيَنظُرُواْ كَيْفَ كَانَ عَـٰقِبَةُ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ ۖ دَمَّرَ ٱللَّهُ عَلَيْهِمْ ۖ وَلِلْكَـٰفِرِينَ أَمْثَـٰلُهَا ﴿١٠﴾

11. Saas waxaa ugu wacan in Alle yahay gargaaraha mu'miniinta, gaaladuna ayna gargaare lahayn.

ذَٰلِكَ بِأَنَّ ٱللَّهَ مَوْلَى ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَأَنَّ ٱلْكَـٰفِرِينَ لَا مَوْلَىٰ لَهُمْ ﴿١١﴾

12. Alle wuxuu galin mu'miniinta camalka fiicanna falay jannooyin ay dureeri dhexdeeda wabiyaal, kuwa gaaloobayna way raaxaysan (adduunka) una cuni sida xooluhu wax u cunaan, naarna waa gurigay ku hoyan.

إِنَّ ٱللَّهَ يُدۡخِلُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ جَنَّٰتٖ تَجۡرِي مِن تَحۡتِهَا ٱلۡأَنۡهَٰرُۖ وَٱلَّذِينَ كَفَرُواْ يَتَمَتَّعُونَ وَيَأۡكُلُونَ كَمَا تَأۡكُلُ ٱلۡأَنۡعَٰمُ وَٱلنَّارُ مَثۡوٗى لَّهُمۡ ١٢

Alle dadka gargaar ugama baahna ee imtixaan dartiis yuu u falay saas, ciddiise diinta Alle difaacda wuu u gargaaraa, gaaladana dulli iyo halaag yaa u dambayn, maxaa yeelay waa xaq diidayaal, waana ruuxu dhulka inuu maraa kuna waanaqaato wixii dhacay, tan kale waa in mu'miniintu rumeeyaan in Alle u gargaari hadday la yimaaddaan niyad san, midnimo, toosni iyo xaq daaficid, taasina waxay ka muuqataa siduu Alle u gargaaray Nabigii (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) iyo asxaabtiisii, mudda yar kadibna diinta islaamku meel walba ku faaftay kana talisay, intaas waxaa u dheer jannada aakharo, maxayse tari in sida xoolaha wax loo cuno mar hadday naaru ka dambayso. **[Muxammad: 7-12].**

13. Immisay jirtay magaalo ka xoog badan magaaladaadan ku bixisay (Maka) aanna hallignay, gargaarana aan helin.

وَكَأَيِّن مِّن قَرۡيَةٍ هِيَ أَشَدُّ قُوَّةٗ مِّن قَرۡيَتِكَ ٱلَّتِيٓ أَخۡرَجَتۡكَ أَهۡلَكۡنَٰهُمۡ فَلَا نَاصِرَ لَهُمۡ ١٣

14. Ruux xaqa cad ee Alle ku sugan ma la midbaa ruux loo qurxiyay camalkiisa xun oo haddana waxa naftiisu jeceshahay (ee xun) raaca.

أَفَمَن كَانَ عَلَىٰ بَيِّنَةٖ مِّن رَّبِّهِۦ كَمَن زُيِّنَ لَهُۥ سُوٓءُ عَمَلِهِۦ وَٱتَّبَعُوٓاْ أَهۡوَآءَهُم ١٤

15. Tilmaanta jannada loogu yaboohay mu'miniinta waa in wabiyaal biya ah oon doorsoomaynin dhexdeeda yihiin, iyo wabiyaal caano ah oon iyana dhadhankoodu doorsoomaynin, iyo wabiyaal khamro (xalaal ah) oo u macaan dadka cabbi, iyo wabiyaal malab ah oo la sifeeyay, waxayna

مَّثَلُ ٱلۡجَنَّةِ ٱلَّتِي وُعِدَ ٱلۡمُتَّقُونَۖ فِيهَآ أَنۡهَٰرٞ مِّن مَّآءٍ غَيۡرِ ءَاسِنٖ وَأَنۡهَٰرٞ مِّن لَّبَنٖ لَّمۡ يَتَغَيَّرۡ طَعۡمُهُۥ وَأَنۡهَٰرٞ مِّنۡ خَمۡرٖ لَّذَّةٖ لِّلشَّٰرِبِينَ وَأَنۡهَٰرٞ مِّنۡ عَسَلٖ مُّصَفّٗىۖ وَلَهُمۡ فِيهَا مِن كُلِّ ٱلثَّمَرَٰتِ وَمَغۡفِرَةٞ مِّن رَّبِّهِمۡۖ كَمَنۡ هُوَ خَٰلِدٞ فِي ٱلنَّارِ وَسُقُواْ مَآءً حَمِيمٗا فَقَطَّعَ أَمۡعَآءَهُمۡ ١٥

jannada ku leeyihiin nooc kasta oo midho ah, iyo dambidhaafka Alle. Ma la mid baa ruux naarta ku waari lagana waraabin biyo kulayl daran oo xiidmahooda gooya.

16. Waxaa ka mid ah gaalada kuwo ku dhagaysan (Nabiyow), markay agtaada ka baxaanna ku dhihi kuwa cilmiga leh (asxaabta) muxuu lahaa dhawaan, kuwaasi waa kuwa Alle daabacay (ka dhigay midaan wax fahmayn) quluubtooda, waxay naftoodu jeclaydna (oo xunna) raacay.

وَمِنْهُم مَّن يَسْتَمِعُ إِلَيْكَ حَتَّىٰٓ إِذَا خَرَجُوا۟ مِنْ عِندِكَ قَالُوا۟ لِلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْعِلْمَ مَاذَا قَالَ ءَانِفًا ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ طَبَعَ ٱللَّهُ عَلَىٰ قُلُوبِهِمْ وَٱتَّبَعُوٓا۟ أَهْوَآءَهُمْ ﴿١٦﴾

Xoog Alle ayaa iska leh, xaq diide kastana Alle wax kuma aha inuu halligo sidii kuwii horeba uu ku falay, xaq iyo baadilna isku mid ma aha. Jannada Alle u darbay mu'miniinta ee wanaaggu ku dhanyahay iyo naar daranna ma sinna, Alleheenna dadka ma dulmiyo ee ruux walba wuxuu falo yuu ka abaal mariyaa, samaan iyo xumaanba, quraanka iyo xaqa oo lagu jeesjeeso waa ficilka gaalada iyo xumaanloowga ee waa in layska jiraa. **[Muxammad: 13-16].**

17. Kuwa hanuunay (Alle) wuxuu u siyaadiyaa hanuun, wuxuuna waafajiyaa (Alle) kayaabiddiisa.

وَٱلَّذِينَ ٱهْتَدَوْا۟ زَادَهُمْ هُدًى وَءَاتَىٰهُمْ تَقْوَىٰهُمْ ﴿١٧﴾

18. Gaaladu ma waxay sugi waxaan ahayn in qiyaamadu kado ugu timaaddo, waxaase yimidba calaamooyinkeedii, ee sideebay xusuus ugu sugnaan hadday qiyaamadu timaaddo.

فَهَلْ يَنظُرُونَ إِلَّا ٱلسَّاعَةَ أَن تَأْتِيَهُم بَغْتَةً ۖ فَقَدْ جَآءَ أَشْرَاطُهَا ۚ فَأَنَّىٰ لَهُمْ إِذَا جَآءَتْهُمْ ذِكْرَىٰهُمْ ﴿١٨﴾

19. Ogow (kuna sugnow Nabiyow) inaan ku xaq lugu caabudaa jirin Allaah mooyee, una dambi dhaaf waydii naftaada iyo mu'miniinta rag iyo haweenba, Alle na waa

فَٱعْلَمْ أَنَّهُۥ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا ٱللَّهُ وَٱسْتَغْفِرْ لِذَنۢبِكَ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَٱلْمُؤْمِنَٰتِ ۗ وَٱللَّهُ يَعْلَمُ مُتَقَلَّبَكُمْ وَمَثْوَىٰكُمْ ﴿١٩﴾

ogyahay dhaqdhaqaaqiinna iyo nagaadigiinnaba.

20. Waxay kuwa xaqa rumeeyay dhahaan maa la soo dejiyo suurad, markiise la soo dajiyo suurad sugan dagaalkana (jahaadkana) lagu sheego waxaad arkaysaa kuwa quluubta ka buka oo ku soo fiirin (Nabiyow) sida ruux sakaraad hayo oo kale, halaag bayna mutaan kuwaasi.

وَيَقُولُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَوۡلَا نُزِّلَتۡ سُورَةٞۖ فَإِذَآ أُنزِلَتۡ سُورَةٞ مُّحۡكَمَةٞ وَذُكِرَ فِيهَا ٱلۡقِتَالُ رَأَيۡتَ ٱلَّذِينَ فِي قُلُوبِهِم مَّرَضٞ يَنظُرُونَ إِلَيۡكَ نَظَرَ ٱلۡمَغۡشِيِّ عَلَيۡهِ مِنَ ٱلۡمَوۡتِۖ فَأَوۡلَىٰ لَهُمۡ ٢٠

21. Daacadnimo iyo hadal wanaagsan yaa u khayr roonaan lahayd, markase xaalku dhaboobo (jahaad la galo) hadday Alle u run sheegaan yaa u khayr badnaan lahayd.

طَاعَةٞ وَقَوۡلٞ مَّعۡرُوفٞۚ فَإِذَا عَزَمَ ٱلۡأَمۡرُ فَلَوۡ صَدَقُواْ ٱللَّهَ لَكَانَ خَيۡرٗا لَّهُمۡ ٢١

Ruuxii xaqa raaciddiisa iyo jidka Alle ku dadaala Alle wuxuu ku abaal mariyaa inuu u siyaadiyo hanuun, wuxuuna waafajiyaa wanaag iyo Alle ka yaabid, ciddii caqli lehna waa inay waqtiga ka faa'iidaysataa, maxaa yeelay qiyaamadu waxay ku imaan kado, markay timaadana cidna calaacal iyo catow wax uma tarto, mar haddii fursadu dhaafto, waana in Alle si dhab ah loo qiraa laguna sugnaado arrintaas, dambi dhafna had iyo jeer la waydiistaa. Jidkiisana lagu toosnaadaa laguna jihaadaa, hadal wanaagsan, niya adag, daacadnimo iyo Alle rumayn dhab ahna lagu dadaalo. **[Muxammad: 17-21].**

22. Amaad mudan tihiin haddaad xaqa (jahaadka) ka jeedsataan inaad fasaadisaan dhulka, qaraabadiinnana goysaan.

فَهَلۡ عَسَيۡتُمۡ إِن تَوَلَّيۡتُمۡ أَن تُفۡسِدُواْ فِي ٱلۡأَرۡضِ وَتُقَطِّعُوٓاْ أَرۡحَامَكُمۡ ٢٢

23. Kuwaasi waa kuwa Alle lacnaday, dhagaha iyo indhahana tiray.

أُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ لَعَنَهُمُ ٱللَّهُ فَأَصَمَّهُمۡ وَأَعۡمَىٰٓ أَبۡصَٰرَهُمۡ ٢٣

24. Miyayna quraanka u fiirsannin (si dhab ah) mise quluubtoodaa daboolan.

أَفَلَا يَتَدَبَّرُونَ ٱلۡقُرۡءَانَ أَمۡ عَلَىٰ قُلُوبٍ أَقۡفَالُهَآ ٢٤

إِنَّ ٱلَّذِينَ ٱرۡتَدُّواْ عَلَىٰٓ أَدۡبَٰرِهِم مِّنۢ بَعۡدِ مَا تَبَيَّنَ لَهُمُ ٱلۡهُدَى ٱلشَّيۡطَٰنُ سَوَّلَ لَهُمۡ وَأَمۡلَىٰ لَهُمۡ ﴿٢٥﴾

25. Kuwa riddoobay (gaalnimo ku noqday) inta xaqu iyo hanuunku u caddaaday ka dib shaydaan baa u qurxiyay, yididiilo (been ahna) ugu yaboohay.

ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمۡ قَالُواْ لِلَّذِينَ كَرِهُواْ مَا نَزَّلَ ٱللَّهُ سَنُطِيعُكُمۡ فِي بَعۡضِ ٱلۡأَمۡرِ وَٱللَّهُ يَعۡلَمُ إِسۡرَارَهُمۡ ﴿٢٦﴾

26. Saas waxaa ugu wacan iney kuwa riddoobay ku dheheen kuwa xaqa nacay waxaan idinku (waafaqaynaa) adeecaynaa amarka qaarkiis (colnimada Nabiga), Alle na waa ogyahay waxay qarsan.

فَكَيۡفَ إِذَا تَوَفَّتۡهُمُ ٱلۡمَلَٰٓئِكَةُ يَضۡرِبُونَ وُجُوهَهُمۡ وَأَدۡبَٰرَهُمۡ ﴿٢٧﴾

27. Ee say noqon markay nafta ka qaadayso malaa'igtu iyadoo ka garaaci wajiga iyo gadaashaba.

ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمُ ٱتَّبَعُواْ مَآ أَسۡخَطَ ٱللَّهَ وَكَرِهُواْ رِضۡوَٰنَهُۥ فَأَحۡبَطَ أَعۡمَٰلَهُمۡ ﴿٢٨﴾

28. Saas waxaa ugu wacan inay raaceen kuwaasi wax Alle ka cadhoodo, neceenna raalli ahaanshihiisa, markaasuu buriyay camalkoodii.

Xaqa iyo wanaagga iyo jihaadka oo laga jeedsado waxay sabab u noqotaa halaag iyo dhibaato, fasaadinta dhulka iyo qaraabada oo la gooyo, kuwa saa falana waa kuwa lacnadda Alle ku dhacdo, maqal iyo aragna aan lahayn, maxaa yeelay ma aha kuwo quraanka fiiriya, arrintaasuna ciqaab adduun yay leedahay aakhira ka hor, Nabiguna (ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) wuxuu yidhi: (dambi ka dhaw in Alle ciqaabta u soo dadajiyo isagoo tii aakhirana u dheer tahay majiro dulmi iyo qaraaba goys). (Waxaa wariyay imaam Axmad binu Xambal). Kuwaase xaqa ka riddooba waa kuwa shaydaan ka adkaaday, xaq diidayaalna ah, Alle na kama qarsoona xaalkoodu, waana kuwa si daran nafta looga qaadi, illeen waxay raaceen wax Alle cadha galiya wanaaggana way neceene. **[Muxammad: 22-28].**

أَمۡ حَسِبَ ٱلَّذِينَ فِي قُلُوبِهِم مَّرَضٌ أَن لَّن يُخۡرِجَ ٱللَّهُ أَضۡغَٰنَهُمۡ ﴿٢٩﴾

29. Kuwii qalbiga ka bukay ma waxay u maleeyeen inaan Alle soo muujinayn xumaanta (iyo xasadka) qalbiga kaga jira.

30. Haddaan doonno waan ku tusin karnaa kuwaas, waxaadna ku aqoonsan calaamad, waxaad kaloo ku oqoonsan hadalka leexsan, Alle na waa ogyahay camalkooda.

وَلَوْ نَشَآءُ لَأَرَيْنَـٰكَهُمْ فَلَعَرَفْتَهُم بِسِيمَـٰهُمْ ۚ وَلَتَعْرِفَنَّهُمْ فِى لَحْنِ ٱلْقَوْلِ ۚ وَٱللَّهُ يَعْلَمُ أَعْمَـٰلَكُمْ ﴿٣٠﴾

31. Waannu idin imtixaanaynaa intaan ka ogaanno (iyadoo bannaanka u soo baxday) kuwiinna jahaadi iyo kuwa samra, waana imtixaanaynaa xaalkiinna.

وَلَنَبْلُوَنَّكُمْ حَتَّىٰ نَعْلَمَ ٱلْمُجَـٰهِدِينَ مِنكُمْ وَٱلصَّـٰبِرِينَ وَنَبْلُوَا۟ أَخْبَارَكُمْ ﴿٣١﴾

32. Kuwa gaaloobay ee jidka Alle ka leexiya dadka Raasuulkana khilaafa (lana collooba) inta xaqu u caddaaday ka dib waxba Alle kama dhimayaan camalkoodana wuu burrin.

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَصَدُّوا۟ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ وَشَآقُّوا۟ ٱلرَّسُولَ مِنۢ بَعْدِ مَا تَبَيَّنَ لَهُمُ ٱلْهُدَىٰ لَن يَضُرُّوا۟ ٱللَّهَ شَيْـًٔا وَسَيُحْبِطُ أَعْمَـٰلَهُمْ ﴿٣٢﴾

33. Kuwa xaqa rumeeyow Alle adeeca, Rasuulkiisana adeeca, camalkiinnana hayska burrinina.

* يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ أَطِيعُوا۟ ٱللَّهَ وَأَطِيعُوا۟ ٱلرَّسُولَ وَلَا تُبْطِلُوٓا۟ أَعْمَـٰلَكُمْ ﴿٣٣﴾

34. Kuwa gaaloobay oo jidka Alle ka leexiyay dadka kadibna dhinta iyagoo gaala ah Alle uma dambi dhaafo.

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَصَدُّوا۟ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ ثُمَّ مَاتُوا۟ وَهُمْ كُفَّارٌ فَلَن يَغْفِرَ ٱللَّهُ لَهُمْ ﴿٣٤﴾

Waxa qalbiga ku jira Alle waa ogyahay samaan iyo xumaanba, hadduu doonana wuu muujin karaa xaalka munaafiqiinta, waxaa ka mid ah calaamooyinkooda diin iyo muslim ceeb ka sheeg iyo carrab leexsan, adduunkuna waa guri imtixaan say u kala muuqdaan runlowga, jahaadaha, samirlaha iyo kuwa xunxun, ruuxiise gaalooba oo xaqa dadka ka reeba Rasuulkana la collooba isagoo xaqu u cad yahay, muxuu Alle u dhimi isagaa la kulmi xumaantiisee, cid xumaan fashay gaalnimana ku dhimatay (Alle Ayaan ka magan galaynaaye) Alle uma dambi dhaafo umana naxariisto. **[Muxammad: 29-34].**

35. Ha tabar darraannina mu'miniintaay ood markaa heshiis u yeedhaan, idinkaaba

فَلَا تَهِنُوا۟ وَتَدْعُوٓا۟ إِلَى ٱلسَّلْمِ وَأَنتُمُ ٱلْأَعْلَوْنَ وَٱللَّهُ مَعَكُمْ

ka sarreeyee Alle na idinla jiraaye, camalkiinnana ma nusqaaminaayee.

وَلَن يَتِرَكُمْ أَعْمَٰلَكُمْ ﴿٣٥﴾

36. Nolosha adduunyo waa uun ciyaar iyo dheeldheel, haddaadse xaqa rumaysaan ood dhawrsataan wuxuu idin siin (Alle) abaalkiinna, xoolihiinnana idin waydiisan maayo.

إِنَّمَا ٱلْحَيَوٰةُ ٱلدُّنْيَا لَعِبٌ وَلَهْوٌ ۚ وَإِن تُؤْمِنُوا۟ وَتَتَّقُوا۟ يُؤْتِكُمْ أُجُورَكُمْ وَلَا يَسْـَٔلْكُمْ أَمْوَٰلَكُمْ ﴿٣٦﴾

37. Hadduu idin waydiiyo (Alle) xoolihiinna (dhammaan) idinkuna celceliyo waad bakhayloobaysaan, waxuuna soo bixin colnimadiinna.

إِن يَسْـَٔلْكُمُوهَا فَيُحْفِكْكُمْ تَبْخَلُوا۟ وَيُخْرِجْ أَضْغَٰنَكُمْ ﴿٣٧﴾

38. Kuwaas xaqa rumeeyow waxaa laydiinku yeedhi inaad jidka Alle wax ku bixisaan, waxaase idinka mid ah kuwo ku bakhayli, ruuxiise bakhayla wuxuu uun kala bakhaylay naftiisa Alle na waa hodon, idinkuna waxaad tihiin fuqaro, haddaad xaqa ka jeedsataanse wuxuu Alle idinku baddali kuwa kale oon idin la mid noqonayn.

هَٰٓأَنتُمْ هَٰٓؤُلَآءِ تُدْعَوْنَ لِتُنفِقُوا۟ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ فَمِنكُم مَّن يَبْخَلُ ۖ وَمَن يَبْخَلْ فَإِنَّمَا يَبْخَلُ عَن نَّفْسِهِۦ ۚ وَٱللَّهُ ٱلْغَنِىُّ وَأَنتُمُ ٱلْفُقَرَآءُ ۚ وَإِن تَتَوَلَّوْا۟ يَسْتَبْدِلْ قَوْمًا غَيْرَكُمْ ثُمَّ لَا يَكُونُوٓا۟ أَمْثَٰلَكُم ﴿٣٨﴾

Mu'miintu waa inay xoog yeeshaan, tabaryarina ka digtoonaadaan, si ayan gaalada ugu hoos noolaannin, xaqoodana loo duudsiyin, maxaa yeelay iyagaaba Alle la jiraa. Hadday dhintaanna waa janno, hadday noolaadaanna waa guul iyo sarrayn, adduunkuna waa dhalanteed ee waa in ruuxa caqliga leh uu ku maraa wanaag iyo Alle ka cabsi, isagoo waajibkiisana gudanaya, waa in jidka Alle na xoolaha lugu bixiyaa, bakhaylnimadana layska jiraa illeen naftaada umbay dhibiye, Allase waa hodon dadkaase u baahan had iyo jeere, ciddiise iskibrisa oo xaqa ka jeedsata wuxuu Alle awoodaa inuu ku baddalo mid ka khayr badan kana wanaagsan. **[Muxammad: 35-38].**

Suurat Al-Fatx

سُورَةُ الفَتۡحِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

إِنَّا فَتَحۡنَا لَكَ فَتۡحًا مُّبِينًا ﴿١﴾

1. Annagaa ku siinnay fatxi (gargaar) cad Nabiyow.

لِّيَغۡفِرَ لَكَ ٱللَّهُ مَا تَقَدَّمَ مِن ذَنۢبِكَ وَمَا تَأَخَّرَ وَيُتِمَّ نِعۡمَتَهُۥ عَلَيۡكَ وَيَهۡدِيَكَ صِرَٰطًا مُّسۡتَقِيمًا ﴿٢﴾

2. Si Alle kuugu dhaafo waxaad hormarsatay iyo wixii dib maray oo gaf ah, nicmadiisana kuugu taam yeelo, jidka toosanna kuugu hanuuniyo.

وَيَنصُرَكَ ٱللَّهُ نَصۡرًا عَزِيزًا ﴿٣﴾

3. Kuuna gargaaro Alle gargaar wayn.

هُوَ ٱلَّذِيٓ أَنزَلَ ٱلسَّكِينَةَ فِي قُلُوبِ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ لِيَزۡدَادُوٓاْ إِيمَٰنٗا مَّعَ إِيمَٰنِهِمۡۗ وَلِلَّهِ جُنُودُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۚ وَكَانَ ٱللَّهُ عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿٤﴾

4. Alle waa kan ku dajiyay xasilloonida quluubta mu'miniinta si ay iimaan ugu siyaadsadaan iimaankoodii, Alle ayaana iska leh samaawaadka iyo dhulka junuudda ku sugan, Alle na waa wax walba oge falsan.

لِّيُدۡخِلَ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ وَٱلۡمُؤۡمِنَٰتِ جَنَّٰتٖ تَجۡرِي مِن تَحۡتِهَا ٱلۡأَنۡهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَا وَيُكَفِّرَ عَنۡهُمۡ سَيِّـَٔاتِهِمۡۚ وَكَانَ ذَٰلِكَ عِندَ ٱللَّهِ فَوۡزًا عَظِيمًا ﴿٥﴾

5. Si uu u galiyo mu'miniinta rag iyo haweenba jannooyin ay dureereyso dhexdeeda wabiyaal iyagoo ku waari, dambigoodana wuu asturi, arrintaasuna Alle agtiisa waxay ku tahay liibaan wayn.

Suuraddan wanaagsani waxay ku soo dagtay markay Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) iyo asaxaabtiisii ka soo laabteen heshiiskii xudeybiya, oo gaaladii Qureysheed u diideen Nabiga iyo asaxaabtiisa inay

cumraystaan, fareenna inay madiina ku noqdaan, shuruudo adagna la dhigteen inkastooy xagga daahirka aad mooddo tabaryari muslimiinta, haddana waxaa ka dambeeyay khayr badan iyo fatxi, waxayna caddayn in Alle naasir iyo gargaare u yahay mu'miniinta, waxaa kale oy ku tusin in jidka toosan lagu sugnaado, xoogna Alle ayaa iska leh, cirka iyo dhulkuna awooddiisay ku hoos jiraan, liibaanta kama dambaysta ahse waa saamaxaad Alle oo la helo iyo jannadiisa siduu mu'miniinta u ballan qaaday. **[Al-Fatx: 1-5].**

وَيُعَذِّبَ ٱلْمُنَٰفِقِينَ وَٱلْمُنَٰفِقَٰتِ وَٱلْمُشْرِكِينَ وَٱلْمُشْرِكَٰتِ ٱلظَّآنِّينَ بِٱللَّهِ ظَنَّ ٱلسَّوْءِ ۚ عَلَيْهِمْ دَآئِرَةُ ٱلسَّوْءِ ۖ وَغَضِبَ ٱللَّهُ عَلَيْهِمْ وَلَعَنَهُمْ وَأَعَدَّ لَهُمْ جَهَنَّمَ ۖ وَسَآءَتْ مَصِيرًا ﴿٦﴾

6. Iyo inuu caddibo munaafiqiinta rag iyo haweenba, iyo mushrikiinta (gaalada) rag iyo haweenba, Alle na u maleeyey mala xun, xumaantu korkooda ha ku wareegto, Alle na ha u cadhoodo, hana lacnado, hana u darbo naarta jahannamo, meel loo ahaadana iyadaa u xun.

وَلِلَّهِ جُنُودُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ وَكَانَ ٱللَّهُ عَزِيزًا حَكِيمًا ﴿٧﴾

7. Alle ayaa iska leh junuudda ku sugan samaawaadka iyo dhulka, Alle na waa adkaade falsan.

إِنَّآ أَرْسَلْنَٰكَ شَٰهِدًا وَمُبَشِّرًا وَنَذِيرًا ﴿٨﴾

8. Annagaa ku dirray Nabiyow adigoo marag ah, bishaareeye digena ah.

لِّتُؤْمِنُوا۟ بِٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ وَتُعَزِّرُوهُ وَتُوَقِّرُوهُ ۚ وَتُسَبِّحُوهُ بُكْرَةً وَأَصِيلًا ﴿٩﴾

9. Si aad dadow Alle u rumaysaan iyo Rasuulkiisa uguna gargaartaan, una waynaysaan, Alle na ugu tasbiixsataan aroor iyo galabba.

إِنَّ ٱلَّذِينَ يُبَايِعُونَكَ إِنَّمَا يُبَايِعُونَ ٱللَّهَ يَدُ ٱللَّهِ فَوْقَ أَيْدِيهِمْ ۚ فَمَن نَّكَثَ فَإِنَّمَا يَنكُثُ عَلَىٰ نَفْسِهِۦ ۖ وَمَنْ أَوْفَىٰ بِمَا عَٰهَدَ عَلَيْهُ ٱللَّهَ فَسَيُؤْتِيهِ أَجْرًا عَظِيمًا ﴿١٠﴾

10. Kuwa Nabiyow kula ballamaya waxay la ballamayaan uun Alle, ballanna ka qaadeen (maadaama ay Rasuulkuusii ballan la galeen), Allana waa la joogaa oo wax xaggooda ka qarsoon ma jiro ruuxiise burriya ballanka naftiisa umbuu ku burriyay, ruuxii oofiyana wuxuu Alle kula ballamay wuxuu siin ajri wayn.

Alle wuxuu ugu goodiyay munaafiqiinta iyo mushrikiintaba caddibaad daran, maxaa yeelay way ka gaaloobeen waxayna u maleeyeen male xun, ciddii saas yeeshana Alle wuu dullayn wuuna u cadhoon oo lacnadi, wuxuuna ku abaalmarin naarta jahannamo (Alle ha naga koriyee), Alle ayaana iska leh cirka iyo dhulka waxa ku sugan, Nabiga Muxammad ahna (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) Alle ayaa soo diray si uu marag, bishaareeye, dige iyo gaadhsiiye ugu noqdo Alle ayaa soo, dadkana waxaa kuwaajib ah dhammaantood inay rumeeyaan, wayneeyaanna una gargaaraan, Alle na had iyo jeer, habeen iyo dharaar ku xidhnaadaan kana dhawrsadaan. **[Al-Fatx: 6-10].**

سَيَقُولُ لَكَ ٱلْمُخَلَّفُونَ مِنَ ٱلْأَعْرَابِ شَغَلَتْنَآ أَمْوَٰلُنَا وَأَهْلُونَا فَٱسْتَغْفِرْ لَنَا ۚ يَقُولُونَ بِأَلْسِنَتِهِم مَّا لَيْسَ فِى قُلُوبِهِمْ ۚ قُلْ فَمَن يَمْلِكُ لَكُم مِّنَ ٱللَّهِ شَيْـًٔا إِنْ أَرَادَ بِكُمْ ضَرًّا أَوْ أَرَادَ بِكُمْ نَفْعًا ۚ بَلْ كَانَ ٱللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرًا ﴿١١﴾

11. Waxay kugu dhihi kuwii ka dib maray (jahaadka) ee reebaadiyaha (carbeed ahaa), waxaa na shuqliyay xoolahannagii, iyo ahalkannagii, ee Alle noo dambi dhaaf waydii, carrabkooda yay ka dhihi waxaan qalbigooda jirin, waxaad ku dhahdaa yaa Alle wax idiinka hanan kara hadduu dhib idinla doono, ama gargaar idinla doono, saas ma aha, ee Alle waa ogyahay waxaad camal falaysaan.

بَلْ ظَنَنتُمْ أَن لَّن يَنقَلِبَ ٱلرَّسُولُ وَٱلْمُؤْمِنُونَ إِلَىٰٓ أَهْلِيهِمْ أَبَدًا وَزُيِّنَ ذَٰلِكَ فِى قُلُوبِكُمْ وَظَنَنتُمْ ظَنَّ ٱلسَّوْءِ وَكُنتُمْ قَوْمًۢا بُورًا ﴿١٢﴾

12. Waxaadse u malayseen inayan Rasuulka iyo mu'miniinta u soo noqonaynin ehelkooda waligood, saasaana lagu qurxiyay qalbigiinna, waxaadna ahaateen kuwo halaagsamay.

وَمَن لَّمْ يُؤْمِنۢ بِٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ فَإِنَّآ أَعْتَدْنَا لِلْكَٰفِرِينَ سَعِيرًا ﴿١٣﴾

13. Ruuxaan Alle rumayn iyo Rasuulkiisa waxaan gaalo u darabnay naarta saciiro.

وَلِلَّهِ مُلْكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ يَغْفِرُ لِمَن يَشَآءُ وَيُعَذِّبُ مَن يَشَآءُ ۚ وَكَانَ ٱللَّهُ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿١٤﴾

14. Alle ayaa iska leh xukunka waxa samaawaadka iyo dhulka ku sugan, wuxuuna u dambi dhaafi cidduu doono, wuxuu caddibi cidduu doono, waana dambi dhaafe naxariiste ah.

Ma habboona in waqtiga muslimiintu dagaal iyo jihaad ku jirto uu ruuxna cudur daar la'aan iska fadhiisto, isagoo ku marmarsoon in xoolihiisii iyo

ehelkiisii shuqliyeen, siday faleen carabtii reer baadiyaha ahayd, oy haddana dambi dhaaf waydiistaan, arrintaasu waa carrab iyo qalbi is khilaafsan, Alle umbaana dhib iyo dheefba hanta wax walbana og, mana aha in rasuulka iyo mu'mininta loo maleeyo xumaan iyo inay jabi ooyan guulaysanaynin iyagoo fayowna u soo noqonaynin ehelkoodii. Alle iyo Rasuulkiisa ciddaan rumaynin wuxuu Alle u darbay naarta saciira, cirka iyo dhulka xukunkooda Alle ayaa iska leh, ruuxuu doonana wuu u dambi dhaafaa, kuu doonana wuu caddibaa waana dambi dhaafe naxariiste ah. **[Al-Fatx: 11-14].**

سَيَقُولُ ٱلْمُخَلَّفُونَ إِذَا ٱنطَلَقْتُمْ إِلَىٰ مَغَانِمَ لِتَأْخُذُوهَا ذَرُونَا نَتَّبِعْكُمْ ۖ يُرِيدُونَ أَن يُبَدِّلُوا۟ كَلَٰمَ ٱللَّهِ ۚ قُل لَّن تَتَّبِعُونَا كَذَٰلِكُمْ قَالَ ٱللَّهُ مِن قَبْلُ ۖ فَسَيَقُولُونَ بَلْ تَحْسُدُونَنَا ۚ بَلْ كَانُوا۟ لَا يَفْقَهُونَ إِلَّا قَلِيلًا ﴿١٥﴾

15. Waxay idinku odhan kuwii dib maray markaad qaniimo aaddaan si aad u soo qaadataan na daaya aan idin raacnee, iyagoo dooni inay baddalaan hadalka Alle, waxaad dhahdaa na raaci maysaan Alle ayaana sidaa yidhi mar hore, waxayse dhihi waad na xasdaysaan,waase kuwo aan wax kasaynin in yar mooyeen.

قُل لِّلْمُخَلَّفِينَ مِنَ ٱلْأَعْرَابِ سَتُدْعَوْنَ إِلَىٰ قَوْمٍ أُو۟لِى بَأْسٍ شَدِيدٍ تُقَٰتِلُونَهُمْ أَوْ يُسْلِمُونَ ۖ فَإِن تُطِيعُوا۟ يُؤْتِكُمُ ٱللَّهُ أَجْرًا حَسَنًا ۖ وَإِن تَتَوَلَّوْا۟ كَمَا تَوَلَّيْتُم مِّن قَبْلُ يُعَذِّبْكُمْ عَذَابًا أَلِيمًا ﴿١٦﴾

16. Waxaad ku dhahdaa Nabiyow kuwa dib maray ee ree baadiyaha ah waxaa laydinku yeedhi kuwa xoog badan oo daran inaad la dagaallantaan intay ka islaamaan, haddaadse addeecdaan wuxuu Alle idin siin ajri fiican, haddaadse jeedsataan saad horayba ugu jeedsateen wuu idin caddibi caddibaad daran.

لَّيْسَ عَلَى ٱلْأَعْمَىٰ حَرَجٌ وَلَا عَلَى ٱلْأَعْرَجِ حَرَجٌ وَلَا عَلَى ٱلْمَرِيضِ حَرَجٌ ۗ وَمَن يُطِعِ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ يُدْخِلْهُ جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ ۖ وَمَن يَتَوَلَّ يُعَذِّبْهُ عَذَابًا أَلِيمًا ﴿١٧﴾

17. Ruux indha la' korkiisa dhib ma saarra iyo ka naafada ah iyo kan buka, (hadday jihaadka ka haraan) ruuxiise Alle addeeca iyo Rasuulkiisa wuxuu galin jannooyin ay dhexdureeri wabiyaal, ruuxiise jeedsada wuu caddibi caddibaad daran.

Saas oo kale ma habboona in marka muslimiintu dagaal iyo duullaan ku jirto laga fadhiisto, marka xoolo iyo qaniimo gaalada laga helana la doono in wax laga helo. Saas waa inayan muslimiintu oggolaannin, maxaa yeelay Alle kama raalii aha, inkastooy dhihi waad na xasdaysaan, maxaa yeelay waa wax ma gartayaal, waase in la imtixaano kuwaas, lana faro inay la dagaallamaan kuwa daran oo xoog badan intay ka islaamaan, hadday saas yeelaan wanaag buu Alle siin, haddayse jeedsadaan siday horayba ugu jeedsadeen wuu caddibi. Ruuxna Alle kuma kallifo wuxuusan karin, saas daraadeed indhoole, naafo, iyo ruux buka midna dhibdagaal ma saarna. **[Al-Fatx: 15-17].**

18. Alle wuu ka raalli noqday mu'miniinta markay kugula ballantamayeen Nabiyow geedka hoostiisa, Alle na waa ogaaday waxa quluubtooda ku sugan,wuxuuna ku dajiyay xasillooni, wuxuuna ku abaal marin fatxi (nasri) dhaw.

* لَّقَدْ رَضِيَ ٱللَّهُ عَنِ ٱلْمُؤْمِنِينَ إِذْ يُبَايِعُونَكَ تَحْتَ ٱلشَّجَرَةِ فَعَلِمَ مَا فِي قُلُوبِهِمْ فَأَنزَلَ ٱلسَّكِينَةَ عَلَيْهِمْ وَأَثَٰبَهُمْ فَتْحًا قَرِيبًا ﴿١٨﴾

19. Iyo qaniimooyin badan oy qaadan doonaan, Alle na waa adkaade falsan.

وَمَغَانِمَ كَثِيرَةً يَأْخُذُونَهَا ۗ وَكَانَ ٱللَّهُ عَزِيزًا حَكِيمًا ﴿١٩﴾

20. Alle na wuxuu idiin yaboohay qaniimooyin badan ood qaadanaysaan, tanna wuu idiin hormariyay (waa qaniimadii khaybar), wuuna idinka reebay gacmaha dadka (gaalada) si ay ugu noqoto mu'miniinta calaamo (runta Nabiga) idiinkuna hanuuniyo jidka toosan.

وَعَدَكُمُ ٱللَّهُ مَغَانِمَ كَثِيرَةً تَأْخُذُونَهَا فَعَجَّلَ لَكُمْ هَٰذِهِۦ وَكَفَّ أَيْدِيَ ٱلنَّاسِ عَنكُمْ وَلِتَكُونَ ءَايَةً لِّلْمُؤْمِنِينَ وَيَهْدِيَكُمْ صِرَٰطًا مُّسْتَقِيمًا ﴿٢٠﴾

21. Waxaa kale oo uu idiin dadajiyay qaniimo kale oydaan awooddin (ilaa iyo maanta), Allana ogaaday (in ay idiin sugnaan). Alle na wax walba waa karaa.

وَأُخْرَىٰ لَمْ تَقْدِرُوا۟ عَلَيْهَا قَدْ أَحَاطَ ٱللَّهُ بِهَا ۚ وَكَانَ ٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرًا ﴿٢١﴾

وَلَوْ قَٰتَلَكُمُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ لَوَلَّوُا۟
ٱلْأَدْبَٰرَ ثُمَّ لَا يَجِدُونَ وَلِيًّا وَلَا
نَصِيرًا ﴿٢٢﴾

22. Hadday idinla diriraan kuwa gaaloobay way carari (oy jabi) sokeeye iyo gargaarana heli maayaan.

سُنَّةَ ٱللَّهِ ٱلَّتِى قَدْ خَلَتْ مِن قَبْلُ ۖ وَلَن
تَجِدَ لِسُنَّةِ ٱللَّهِ تَبْدِيلًا ﴿٢٣﴾

23. Saasna waa waddadii Alle ee u horreysay ummadihii tagay, wax baddali karana ma jiro.

Alle waa ka raalli noqday, asaxaabtii Nabiga, markay kula ballantameen Nabiga (ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) xudaybiya oo maka u dhaw, wanaag iyo xasilloonina ku abaal mariyay, ruuxii mu'min ah oo laga helo saasna Alle wuxuu ku abaal marin gargaar iyo nasri iyo qaniimooyin, maxaa yeelay isagaa awood leh, Alle na waa u oofiyay ballankii mu'miniinta oo waa kii magaalada Maka ee barakaysan u soo celiyay mu'miintii, waxaana sunnada Alle ka mid ah in dadka xaqa ku toosan ee mu'miinta ah ay adkaadaan, waana xaq aan la baddali karin, waase kuwee kuwaas Alle u gargaari, waa kuwa dhabahaan xaqa u rumeeyay una raacay. **[Al-Fatx: 18-23].**

وَهُوَ ٱلَّذِى كَفَّ أَيْدِيَهُمْ عَنكُمْ
وَأَيْدِيَكُمْ عَنْهُم بِبَطْنِ مَكَّةَ مِنۢ
بَعْدِ أَنْ أَظْفَرَكُمْ عَلَيْهِمْ ۚ وَكَانَ ٱللَّهُ بِمَا
تَعْمَلُونَ بَصِيرًا ﴿٢٤﴾

24. Alle waa kan idin kala reebay «idinna kala ilaaliyay» adinka iyo gaaladii markaad maka gudeheeda joogteen intuu idin makaniyay korkooda kaddib, Alle na waa arkaa waxaad camal falaysaan.

هُمُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَصَدُّوكُمْ عَنِ
ٱلْمَسْجِدِ ٱلْحَرَامِ وَٱلْهَدْىَ مَعْكُوفًا
أَن يَبْلُغَ مَحِلَّهُۥ ۚ وَلَوْلَا رِجَالٌ مُّؤْمِنُونَ
وَنِسَآءٌ مُّؤْمِنَٰتٌ لَّمْ تَعْلَمُوهُمْ أَن
تَطَـُٔوهُمْ فَتُصِيبَكُم مِّنْهُم مَّعَرَّةٌۢ بِغَيْرِ
عِلْمٍ ۖ لِّيُدْخِلَ ٱللَّهُ فِى رَحْمَتِهِۦ مَن يَشَآءُ ۚ
لَوْ تَزَيَّلُوا۟ لَعَذَّبْنَا ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مِنْهُمْ
عَذَابًا أَلِيمًا ﴿٢٥﴾

25. Gaaladii makaad waa kuwii masaajidka xurmaysan idinka reebay iyadooy hadyadii darban tahay, inay gaadho halkii lagu xalaalayn lahaa, haddaynan jirin rag iyo haween mu'miiin ah (oo la nool) idinna aydaan ogayn in aad baabi'neeysaan ayna mashaqo idinka haleesho (Alle waa idiin fasixi lahaa); si uu u galiyo naxariistiisa cidduu doono (yuu saas u yeelay), hadday mu'miintu ka soocmi

lahaayeen gaalada wuxuu Alle caddibi lahaa gaalada caddibaad daran.

26. Xusuusta marka Alle yeelay kuwii gaaloobay quluubtooda islawayni iyo cadho, sidii isla waynidii iyo cadhadii jaahiliinta oo Alle ku dajiyay xasilloonidiisii Rasuulkiisa korkiisa iyo mu'miniinta, waafajiyayna kalimada dhawrsashada (ashahaadada iyo ballan ku sugnaanshaha), iyagaana ugu mudan kalimadaas ehelna u ah, Alle na wax walba waa ogyahay.

إِذْ جَعَلَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ فِى قُلُوبِهِمُ ٱلْحَمِيَّةَ حَمِيَّةَ ٱلْجَٰهِلِيَّةِ فَأَنزَلَ ٱللَّهُ سَكِينَتَهُۥ عَلَىٰ رَسُولِهِۦ وَعَلَى ٱلْمُؤْمِنِينَ وَأَلْزَمَهُمْ كَلِمَةَ ٱلتَّقْوَىٰ وَكَانُوٓاْ أَحَقَّ بِهَا وَأَهْلَهَا ۚ وَكَانَ ٱللَّهُ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمًا ﴿٢٦﴾

Alle ayaa awood leh, markuu doonana wuu kala baajiyaa dagaalka mu'miniinta iyo gaalada, xigmo darteed, sidii uu ku falay Nabigii (ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) iyo asaxaabtiisii iyo gaaladii ree makaad ee ahaa kuwii ka celiyay inay Maka galaan, si ay u cumraystaan, Alle wuu dhawraa mu'miniinta, wuuna u naxariistaa, isla wayni iyo jaahilnimana wax ma tarto ee wanaag, Alle ka yaabid, xasillooni iyo iimaanbaa wax tara waana jidka mu'miniinta. **[Al-Fatx: 24-26].**

27. Alle waa u rumeeyay Rasuulka riyadiisii si dhab ah, ahaydna in mu'miniintu gali masjidka xurmaysan hadduu Alle doono, iyagoo aammin ah oo timaha xiiri ama gaabin (xajka iyo cumrada ka dib) iyagoon cidna ka cabsanaynin, wuxuuna Alle ogyahay waxaydaan ogayn, markaasuu yeelay galitaanka maka ka soke fatxi (xudaybiya).

لَّقَدْ صَدَقَ ٱللَّهُ رَسُولَهُ ٱلرُّءْيَا بِٱلْحَقِّ ۖ لَتَدْخُلُنَّ ٱلْمَسْجِدَ ٱلْحَرَامَ إِن شَآءَ ٱللَّهُ ءَامِنِينَ مُحَلِّقِينَ رُءُوسَكُمْ وَمُقَصِّرِينَ لَا تَخَافُونَ ۖ فَعَلِمَ مَا لَمْ تَعْلَمُواْ فَجَعَلَ مِن دُونِ ذَٰلِكَ فَتْحًا قَرِيبًا ﴿٢٧﴾

28. Alle waa kan la diray Rasuulkiisa hanuun iyo diin xaq ah, si uu uga sare mariyo diimaha oo dhan, Alle ayaana marag ku filan.

هُوَ ٱلَّذِىٓ أَرْسَلَ رَسُولَهُۥ بِٱلْهُدَىٰ وَدِينِ ٱلْحَقِّ لِيُظْهِرَهُۥ عَلَى ٱلدِّينِ كُلِّهِۦ ۚ وَكَفَىٰ بِٱللَّهِ شَهِيدًا ﴿٢٨﴾

29. Muxammad waa Rasuulkii Alle, kuwa la jirana waa ku daran yihiin gaalada, dhexdoodana way isu naxariistaan, waxaad arkaysaa iyagoo rukuucsan oo sujuudsan oo dalbi deeqda Alle iyo raalli ahaanshihiisa, calaamadooduna wajigooday ka muuqataa, sujuudda raadkeeda darteed, saasaana lagu tilmaamay tawreed, tilmaantooda injiilna waxay la mid yihiin beer soo bixisay fiidda oo xoogaysatay oo si fiican u istaagtay layaabna galisay beeralayda, si uu Alle ugu cadho galiyo gaalada, Alle wuxuu u yaboohay kuwa xaqa rumeeyay camal wanaagsanna falay oo mu'miniinta ka mid ah dambi dhaaf iyo ajri wayn.

مُّحَمَّدٞ رَّسُولُ ٱللَّهِۚ وَٱلَّذِينَ مَعَهُۥٓ أَشِدَّآءُ عَلَى ٱلۡكُفَّارِ رُحَمَآءُ بَيۡنَهُمۡۖ تَرَىٰهُمۡ رُكَّعٗا سُجَّدٗا يَبۡتَغُونَ فَضۡلٗا مِّنَ ٱللَّهِ وَرِضۡوَٰنٗاۖ سِيمَاهُمۡ فِي وُجُوهِهِم مِّنۡ أَثَرِ ٱلسُّجُودِۚ ذَٰلِكَ مَثَلُهُمۡ فِي ٱلتَّوۡرَىٰةِۚ وَمَثَلُهُمۡ فِي ٱلۡإِنجِيلِ كَزَرۡعٍ أَخۡرَجَ شَطۡـَٔهُۥ فَـَٔازَرَهُۥ فَٱسۡتَغۡلَظَ فَٱسۡتَوَىٰ عَلَىٰ سُوقِهِۦ يُعۡجِبُ ٱلزُّرَّاعَ لِيَغِيظَ بِهِمُ ٱلۡكُفَّارَۗ وَعَدَ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ مِنۡهُم مَّغۡفِرَةٗ وَأَجۡرًا عَظِيمَۢا ٢٩

Riyada Nabiyadu waa xaq, markuu Rasuulkuna arkay isaga iyo asaxaabta oo dawaafi kacbada haddana laga soo celiyay inuu maka galo yaa dad waydiiyeen xaalkaas, markaasaa Alle caddeeyay inay xaq noqon, wayna rumoowday ru'yadii, Nabigii iyo asaxaabtiina waa galeen iyagoo aamin ah, wayna dawaafeen sidii Alle ugu yaboohay, tan kale waa in mu'miintu isu naxariistaan dhexdooda, waase inay ku darraadaan iskana celiyaan gaalada, sida Alle tilmaamay, Nabiguna wuxuu yidhi: mu'miinta is jacaylkoodu iyo isu naxariisashadoodu waxay la mid tahay jidh kaliya oo hadduu qaar jirrado qaarka kale la xanuunsan lana soo jeedi. Rasuulka Muxammad ah iyo asaxaabtiisa kutubihii hore waa lagu tilmaamay wanaaggooda iyo isjacaylkooda iyo geesinnimadoodaba iyagoo lagu shabbahay beer soo kacaysa, ee waa in raadkoodii la raacaa wanaaggoodiina lagu daydaa. **[Al-Fatx: 27-29].**

Suurat Al-Xujuraat

سُورَةُ الحُجُرَاتِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تُقَدِّمُواْ بَيْنَ يَدَيِ ٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ ۖ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ﴿١﴾

1. Kuwa xaqa rumeeyow ha ku dagdagina Alle iyo Rasuulkiisa hortood (waxayan fasixin), Alle na ka dhawrsada illeen wax walba wuu maqli wuuna og yahaye.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تَرْفَعُوٓاْ أَصْوَٰتَكُمْ فَوْقَ صَوْتِ ٱلنَّبِيِّ وَلَا تَجْهَرُواْ لَهُۥ بِٱلْقَوْلِ كَجَهْرِ بَعْضِكُمْ لِبَعْضٍ أَن تَحْبَطَ أَعْمَٰلُكُمْ وَأَنتُمْ لَا تَشْعُرُونَ ﴿٢﴾

2. Kuwa xaqa rumeeyow ha ka koryeelina codkiinna codka Nabiga, hana kula jahrina (qaylyina) hadal sida qaarkiin qaar ugula jahro (qaylyo) si aan camalkiinnu u burin idinkoon ogayn.

إِنَّ ٱلَّذِينَ يَغُضُّونَ أَصْوَٰتَهُمْ عِندَ رَسُولِ ٱللَّهِ أُوْلَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ ٱمْتَحَنَ ٱللَّهُ قُلُوبَهُمْ لِلتَّقْوَىٰ ۚ لَهُم مَّغْفِرَةٌ وَأَجْرٌ عَظِيمٌ ﴿٣﴾

3. Kuwa codkooda hoos u dhiga Rasuulka agtiisa kuwaasi waa kuwo Alle imtixaanay quluubtooda dhawrsasho darteed, waxayna mudan yihiin dambi dhaaf iyo ajri wayn.

إِنَّ ٱلَّذِينَ يُنَادُونَكَ مِن وَرَآءِ ٱلْحُجُرَٰتِ أَكْثَرُهُمْ لَا يَعْقِلُونَ ﴿٤﴾

4. Kuwa kaaga dhawaaqi qolalka gadaashooda badankoodu wax ma kasayaan.

وَلَوْ أَنَّهُمْ صَبَرُواْ حَتَّىٰ تَخْرُجَ إِلَيْهِمْ لَكَانَ خَيْرًا لَّهُمْ ۚ وَٱللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٥﴾

5. Hadday samraan intaad uga soo bixi yaa u khayr badnaan lahayd, Alle na waa dambi dhaafe naxariista.

Ruuxa mu'minka xaqa ah waa inuu Alle u hoggaansamo Rasuulkiisana ka danbeeyo, waxaan Alle iyo Rasuulkiisu bannaynna (xalaalaynin) lagu deg degin waana in si adab iyo xushmad ah loo qaddariyaa Nabiga, si fiicanna looga asluubsadaa Alle quraankiisa iyo Nabiga qoowlkiisa.

Aayadahanna dhammaan waxay mu'miniinta ku hanuunin waynaynta Alle iyo tixgalinta Nabiga iyo addeeciddooda, si loogu liibaano adduunka. **[Al-Xujuraat: 1-5].**

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِن جَآءَكُمْ فَاسِقٌۢ بِنَبَإٖ فَتَبَيَّنُوٓاْ أَن تُصِيبُواْ قَوْمَۢا بِجَهَٰلَةٖ فَتُصْبِحُواْ عَلَىٰ مَا فَعَلْتُمْ نَٰدِمِينَ ٦

6. Kuwa xaqa rumeeyow hadduu idiinla yimaaddo faasiq war, hubsada, si aydaan dad u dhibin ogaansho la'aan, markaasna aad shallaydaan waxaad fasheen.

وَٱعْلَمُوٓاْ أَنَّ فِيكُمْ رَسُولَ ٱللَّهِۚ لَوْ يُطِيعُكُمْ فِي كَثِيرٖ مِّنَ ٱلْأَمْرِ لَعَنِتُّمْ وَلَٰكِنَّ ٱللَّهَ حَبَّبَ إِلَيْكُمُ ٱلْإِيمَٰنَ وَزَيَّنَهُۥ فِي قُلُوبِكُمْ وَكَرَّهَ إِلَيْكُمُ ٱلْكُفْرَ وَٱلْفُسُوقَ وَٱلْعِصْيَانَۚ أُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلرَّٰشِدُونَ ٧

7. Ogaadana in Rasuulkii Alle idin dhex joogo, hadduu idinku addeeco waxyaala badanna aad dhibboonaysaan, wuxuuse Alle idinla jeclaaday iimaan, kuna qurxiyay quluubtiinna, wuxuuna idinla nacay gaalnimo, faasiqnimo iyo caasinnimo, kuwaasina waa kuwa hanuunsan.

فَضْلًا مِّنَ ٱللَّهِ وَنِعْمَةٗۚ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٞ ٨

8. Waa fadliga (siinta) Alle iyo naxariistiisa, Alle na wax walba waa ogyahay, waana falsame.

وَإِن طَآئِفَتَانِ مِنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ٱقْتَتَلُواْ فَأَصْلِحُواْ بَيْنَهُمَاۖ فَإِنۢ بَغَتْ إِحْدَىٰهُمَا عَلَى ٱلْأُخْرَىٰ فَقَٰتِلُواْ ٱلَّتِي تَبْغِي حَتَّىٰ تَفِيٓءَ إِلَىٰٓ أَمْرِ ٱللَّهِۚ فَإِن فَآءَتْ فَأَصْلِحُواْ بَيْنَهُمَا بِٱلْعَدْلِ وَأَقْسِطُوٓاْۖ إِنَّ ٱللَّهَ يُحِبُّ ٱلْمُقْسِطِينَ ٩

9. Hadday laba qolo oo mu'miniita ah dagaallamaan heshiisiiya dhexdooda, hadday midu ku xadgudubto tan kale la dirira tan xadgubtay intay amarka Alle uga noqoto (xaqa aqoonsato), hadday u noqotana si caddaalad ah u wanaajiya dhexdoooda una garsoora, Alle wuxuu jecel yahay kuwa garsooree.

10. Mu'miniintu waa uun walaalo, ee wanaajiya walaalihiin dhexdooda, Alle na ka dhawrsada, waxaad u dhawdihiin inuu idiin naxariistee.

إِنَّمَا ٱلْمُؤْمِنُونَ إِخْوَةٌ فَأَصْلِحُوا۟ بَيْنَ أَخَوَيْكُمْ ۚ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ ﴿١٠﴾

Ruuxa mu'minka ah waa inuusan maqlin kutidhi kuteen iyo sheeko, si uusan dad kale meel ugaga dhicin, markaasna nidaamo iyo shallayto ugu dambayn, waase in wax la hubsadaa, kitaabka Alle iyo sunnada Nabigana la raaco, lana toosnaado oo xumaanta iyo gaalnimada laga fogaado, si mu'min dhab ah loo noqdo, dadka mu'miniinta ahna waa walaalo, waana inay is jeclaadaan isna gargaaraan, siduu Nabigu (ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yelee) yidhi: «muslimku waa walaalka muslimka, yuuna dulmiyin, yuunana dhiibin», cidda gardaranna la qabto wanaagna mu'miniinta dhexdooda la yeelo illeen waa walaalee. **[Al-Xujuraat: 6-10].**

11. Kuwa xaqa rumeeyow yuuna yasin ragna rag (kale) waxay u dhawdahay inuu ka khayr badan yahaye, haweenna yayna haween yasin waxay u dhawyihiin inay ka khayr badan yihiine, hana ceebeynina naftiinna, hana isugu dhawaaqina naanays xun, waxaa xun magaca faasiqnimada iimaan kadib, ciddaan tawbad keeninna waa daalimiin.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا يَسْخَرْ قَوْمٌ مِّن قَوْمٍ عَسَىٰٓ أَن يَكُونُوا۟ خَيْرًا مِّنْهُمْ وَلَا نِسَآءٌ مِّن نِّسَآءٍ عَسَىٰٓ أَن يَكُنَّ خَيْرًا مِّنْهُنَّ ۖ وَلَا تَلْمِزُوٓا۟ أَنفُسَكُمْ وَلَا تَنَابَزُوا۟ بِٱلْأَلْقَٰبِ ۖ بِئْسَ ٱلِٱسْمُ ٱلْفُسُوقُ بَعْدَ ٱلْإِيمَٰنِ ۚ وَمَن لَّمْ يَتُبْ فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلظَّٰلِمُونَ ﴿١١﴾

12. Kuwa xaqa rumeeyow ka dhawrsada wax badan oo mala ah, maxaa yeelay malaha qaarkiis waa dambi, hana is jaasuusina, qaarkiinna qaar yuusan xamannin, miyuu jecel yahay midkiinna inuu cuno hilibka walaalkiis oo mayd ah, waad neceb tihiin arrintaa, Alle na ka dhawrsada waa tooba aqbale naxariistee.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ٱجْتَنِبُوا۟ كَثِيرًا مِّنَ ٱلظَّنِّ إِنَّ بَعْضَ ٱلظَّنِّ إِثْمٌ ۖ وَلَا تَجَسَّسُوا۟ وَلَا يَغْتَب بَّعْضُكُم بَعْضًا ۚ أَيُحِبُّ أَحَدُكُمْ أَن يَأْكُلَ لَحْمَ أَخِيهِ مَيْتًا فَكَرِهْتُمُوهُ ۚ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ تَوَّابٌ رَّحِيمٌ ﴿١٢﴾

13. Dadow waxaan idinka abuurray lab iyo dhaddig, waxaanna idinka yeellay shucuub iyo qabiilooyin si aad isu aqoonsataan, ruuxase ugu sharaf badan Alle agtiisa waa ka idiinku dhawrsasho badan, Alle na wax walba waa ogyahay.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِنَّا خَلَقۡنَٰكُم مِّن ذَكَرٖ وَأُنثَىٰ وَجَعَلۡنَٰكُمۡ شُعُوبٗا وَقَبَآئِلَ لِتَعَارَفُوٓاْۚ إِنَّ أَكۡرَمَكُمۡ عِندَ ٱللَّهِ أَتۡقَىٰكُمۡۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلِيمٌ خَبِيرٞ ١٣

Aayadahani waa aayado la yaab leh, oo mu'miniinta ku toosin kuna hanuunin waddada wanaagsan, ugana digi jidka xun sida xaqiraadda, yasidda, naanays xun isugu yeedhidda, is ceebeynta, tuhunka, malaha badan, iyo isjaasuusidda, dhammaan waxyaalahaasuna waa wax ku xun diinta islaamka, ruuxa mu'minka xaqa ahna waa inuu ka fogaadaa dhibka walaalihiisa muslimka iyo xumayntiisa siduu Nabigu yidhi (ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee): «ruuxa muslinka ah waa ka xaaraan muslimka, xoolihiisa, sharaftiisa iyo dhiiggiisaba, waxaana shar ugu filan ruux inuu xaqiro walaalkiisa muslimka ah». Waxaa wariyay abuu Daawuud iyo Tirmidi. **[Al-Xujuraat: 11-13].**

14. Waxay dheheen ree baadiyihii carbeed waan rumaynay (xaqa), waxaad ku dhahdaa maydaan rumaynin, laakiin dhaha waan hoggaansannay, iimaankuna wali quluubtiinna ma galin, haddaadse adeecdaan Alle iyo Rasuulkiisa kama nusqaamiyo camalkiinna waxba, Alle na waa dambi dhaafe naxariista.

* قَالَتِ ٱلۡأَعۡرَابُ ءَامَنَّاۖ قُل لَّمۡ تُؤۡمِنُواْ وَلَٰكِن قُولُوٓاْ أَسۡلَمۡنَا وَلَمَّا يَدۡخُلِ ٱلۡإِيمَٰنُ فِي قُلُوبِكُمۡۖ وَإِن تُطِيعُواْ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ لَا يَلِتۡكُم مِّنۡ أَعۡمَٰلِكُمۡ شَيۡـًٔاۚ إِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٞ رَّحِيمٌ ١٤

15. Kuwa mu'miniinta ah waa kuwa uun rumeeyay Alle iyo Rasuulkiisa oon shakiyin, kuna jahaada xoolahooda iyo naftooda jidka Alle dartiis, kuwaasi waa kuwa runlowga ah.

إِنَّمَا ٱلۡمُؤۡمِنُونَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ بِٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ ثُمَّ لَمۡ يَرۡتَابُواْ وَجَٰهَدُواْ بِأَمۡوَٰلِهِمۡ وَأَنفُسِهِمۡ فِي سَبِيلِ ٱللَّهِۚ أُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلصَّٰدِقُونَ ١٥

16. Waxaad dhahdaa ma Alle ayaad u sheegeysaan diintiinna isagoo og waxa samaawaadka iyo dhulkaba ku sugan, Alle na wax walba waa ogyahay.

قُلۡ أَتُعَلِّمُونَ ٱللَّهَ بِدِينِكُمۡ وَٱللَّهُ يَعۡلَمُ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلۡأَرۡضِۚ وَٱللَّهُ بِكُلِّ شَيۡءٍ عَلِيمٞ ١٦

يَمُنُّونَ عَلَيْكَ أَنْ أَسْلَمُوا۟ ۖ قُل لَّا تَمُنُّوا۟
عَلَىَّ إِسْلَٰمَكُم ۖ بَلِ ٱللَّهُ يَمُنُّ عَلَيْكُمْ
أَنْ هَدَىٰكُمْ لِلْإِيمَٰنِ إِن كُنتُمْ
صَٰدِقِينَ ﴿١٧﴾

17. Waxay kugu mannaysan inay islaameen, waxaad dhahdaa haygu mannaysannina islaamkiinna, Alle ayaa manna idinku leh inuu idinku hanuuniyay iimaanka haddaad run sheegeysaan.

إِنَّ ٱللَّهَ يَعْلَمُ غَيْبَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ
وَٱللَّهُ بَصِيرٌۢ بِمَا تَعْمَلُونَ ﴿١٨﴾

18. Alle waa ogyahay waxa samaawaadka ku maqan iyo dhulkaba, Alle na waa arkaa waxaad camal falaysaan.

Xaq rumaynta iyo Alle aqoontu ma aha wax ruux walba iska sheegan, ee waxay u baahan tahay camal fal iyo iimaan dhab ah, waana inaan la noqonin kuwo daahirka ka muslin ah hoostana aan iimaanku qalbigooda xoog ku yeelan, sida kuwa aayaddu sheegeyso. Mu'minka runta ah waa ka xaqa si dhab ah u rumeeyay shakina galin, xoolihiisa iyo naftiisana jidka Alle ugu jihaada, cid walbana Alle waa ogyahay wuxuu yahay umana baahna in looga warramo, illeen isagaa wax walba oge, islaamnimadana cidna ha ku mannaysan adaaba Alle kuu sama falaye markuu kugu hanuuniyay jidka toosan, isagaana manno kugu leh. Siduu Nabigu yidhi (ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee): ansaareey miyaanan idin helin idinkoo baadi ah oo Alle igu kiin hanuuniyay iyo idinkoo kala tagsan oo Alle igu kiin kulmiyay, ood caydh ahaydeen oo Alle igu kiin hodmiyay, markuu hadal dhahaba waxay dhahayeen: Alle iyo Rasuulkiisa yaa manno leh. Bukhaari iyo Muslim. **[Al-Xujuraat: 14-18].**

Suurat Qaaf

سُورَةُ قٓ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Alle wuxuu ku dhaartay quraanka sharafta leh (in dadka la soo bixin).

قٓۚ وَٱلۡقُرۡءَانِ ٱلۡمَجِيدِ ١

2. Waxayse la yaabeen inuu u yimid dige ka mid ah oy markaas dheheen gaaladii kan waa wax la yaab leh.

بَلۡ عَجِبُوٓاْ أَن جَآءَهُم مُّنذِرٞ مِّنۡهُمۡ فَقَالَ ٱلۡكَٰفِرُونَ هَٰذَا شَيۡءٌ عَجِيبٌ ٢

3. Ma markaan dhimanno oon carro noqonno yaa nala soo celin, taas waa soo celin fog.

أَءِذَا مِتۡنَا وَكُنَّا تُرَابٗاۖ ذَٰلِكَ رَجۡعُۢ بَعِيدٞ ٣

4. Waan ognahay waxa dhulku ka cunay jidhkooda, agtannada waxaa yaalla kitaab koobay wax walba, oo ilaashan.

قَدۡ عَلِمۡنَا مَا تَنقُصُ ٱلۡأَرۡضُ مِنۡهُمۡۖ وَعِندَنَا كِتَٰبٌ حَفِيظُۢ ٤

5. Waxaybase beeniyeen xaqii markuu u yimid, waxayna ku sugan yihiin xaal qasan.

بَلۡ كَذَّبُواْ بِٱلۡحَقِّ لَمَّا جَآءَهُمۡ فَهُمۡ فِيٓ أَمۡرٖ مَّرِيجٍ ٥

6. Miyayna eegin samada korkooda ah sidaan u dhisnay una qurxinnay ayna duleella u lahayn.

أَفَلَمۡ يَنظُرُوٓاْ إِلَى ٱلسَّمَآءِ فَوۡقَهُمۡ كَيۡفَ بَنَيۡنَٰهَا وَزَيَّنَّٰهَا وَمَا لَهَا مِن فُرُوجٖ ٦

7. Dhulkana waan waasicinnay waxaanna ku sugnay buuro, waxaanna ka soo bixinnay

وَٱلۡأَرۡضَ مَدَدۡنَٰهَا وَأَلۡقَيۡنَا فِيهَا رَوَٰسِيَ وَأَنۢبَتۡنَا فِيهَا مِن كُلِّ زَوۡجِۭ بَهِيجٖ ٧

dhexdiisa nooc kasta oo quruxsan.

8. Inay garansiin iyo waano u noqoto ruux kasta oo addoon Alle oo toobad keen badane ah.

تَبۡصِرَةٗ وَذِكۡرَىٰ لِكُلِّ عَبۡدٖ مُّنِيبٖ ٨

Suuraddani waa suurad la yaab leh oo kulmisay abuuridda khalqiga, soo bixinta, xisaabta, jannada, naarta, wanaag marinta, ciqaaabta, rajo galinta iyo cabsi galintaba. Alle na wuxuu quraanka ugu dhaartay in waxa suuraddu sheegeyso xaq yahay, Alle na wax kama cajiso, soo bixinta dadka iyo kulminta xubnohoodiina awood buu u leeyahay, maxaa yeelay wax walba waa ogyahay, waana kan inoogu nimceeyay cirka korkeenna ah ee quruxda badan iyo dhulka uu inoo waasiciyay ee aan ku dul noollahay wax kasta oo wanaagsanna inooga soo bixiyay, si ay waano, Alle aqoonsi iyo toobad keen innoogu noqoto, waana arrin Alle lugu mahadiyaa. **[Qaaf: 1-8].**

9. Waxaan ka soo dajinnay samada biyo barakaysan oon ku soo bixinnay beero iyo midho la goosto.

وَنَزَّلۡنَا مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءٗ مُّبَٰرَكٗا فَأَنۢبَتۡنَا بِهِۦ جَنَّٰتٖ وَحَبَّ ٱلۡحَصِيدِ ٩

10. Iyo geedtimireed dheer oo fidsan oo leh fiido wax ka soo dhashaan oo is dul saaran.

وَٱلنَّخۡلَ بَاسِقَٰتٖ لَّهَا طَلۡعٞ نَّضِيدٞ ١٠

11. Si addoommada Alle loogu irsaaqo, biyahaana waxaan ku noolaynay magaalo dhimatay, saasayna soo bixintu tahay.

رِّزۡقٗا لِّلۡعِبَادِ وَأَحۡيَيۡنَا بِهِۦ بَلۡدَةٗ مَّيۡتٗاۚ كَذَٰلِكَ ٱلۡخُرُوجُ ١١

12. Kuwa reer makaad hortooda waxaa xaqii beeniyay qoomkii (Nabi) Nuux iyo Rasi dadkeedii iyo Thamuud.

كَذَّبَتۡ قَبۡلَهُمۡ قَوۡمُ نُوحٖ وَأَصۡحَٰبُ ٱلرَّسِّ وَثَمُودُ ١٢

13. Iyo ree Caad iyo Fircoon iyo (Nabi) Luud walaalihiis (qoomkiisii).

وَعَادٞ وَفِرۡعَوۡنُ وَإِخۡوَٰنُ لُوطٖ ١٣

14. Iyo kayntii dadkeedii (Nabi Shucayb qoomkiisii) iyo qoomkii Tubbac, dhammaantood waxay

وَأَصۡحَٰبُ ٱلۡأَيۡكَةِ وَقَوۡمُ تُبَّعٖۚ كُلّٞ كَذَّبَ ٱلرُّسُلَ فَحَقَّ وَعِيدِ ١٤

beeniyeen rasuulladdi, waxaana ku dhacay wixii Alle ugu goodiyay (ciqaabtii).

15. Ma waxaan ka noognay abuuriddii hore, waxayse shakisan yihiin abuuridda cusub (soo bixinta).

أَفَعَيِينَا بِٱلْخَلْقِ ٱلْأَوَّلِ ۚ بَلْ هُمْ فِى لَبْسٍ مِّنْ خَلْقٍ جَدِيدٍ ﴿١٥﴾

Ilaaheen nicmadiisu waa badan tahay, waxaana ka mid ah roobka uu ku soo bixiyo cunnada kala duwan, si khalqiga Alle ugu noolaadaan, una nooleeyo magaalo abaarowday oo dhimatay, si ay daliil ugu noqoto dadka soo bixinta qiyaame, maxaa yeelay kama darra abuuriddii hore siduu Alle ku yidhi hadalkiisa qudsiga ah: «waxay dhihi banii'aadamku iima soo celinayo Alle siduu igu billaabay, abuurka horana iigama fududa soo celinta». Bukhaari ayaa wariyey.

Xaqdiidayaashu ma aha wax cusub iyo wax ku gaar ah kuwii Nabiga beeniyay, ee waxaa Nabiyadoodii iyo rasuulladoodii beeniyay gaalo badan oo hore, waxaase ku dhacday halaag, waxaana dhulkii u hadhay xaqii Alle ee Nabiyadu u yeedhayeen. **[Qaaf: 9-15].**

16. Dhab ahaan yaan u abuurray insaanka (dadka) waana ognahay waxay naftiisu ku waswaasin annagaana uga dhaw xididka dhuunta.

وَلَقَدْ خَلَقْنَا ٱلْإِنسَٰنَ وَنَعْلَمُ مَا تُوَسْوِسُ بِهِۦ نَفْسُهُۥ ۖ وَنَحْنُ أَقْرَبُ إِلَيْهِ مِنْ حَبْلِ ٱلْوَرِيدِ ﴿١٦﴾

17. Markay la kulmi (oo qori) malaa'igta ilaalinaysa qofka oo midigta iyo bidixda ka fadhida (hadalkiisa iyo falkiisa).

إِذْ يَتَلَقَّى ٱلْمُتَلَقِّيَانِ عَنِ ٱلْيَمِينِ وَعَنِ ٱلشِّمَالِ قَعِيدٌ ﴿١٧﴾

18. Wax kastoo uu ku hadlo waxaa la jooga raqiib (xaafida) iyo catiid xaadira (oo qori).

مَّا يَلْفِظُ مِن قَوْلٍ إِلَّا لَدَيْهِ رَقِيبٌ عَتِيدٌ ﴿١٨﴾

19. Waxaa u yimid sakaraadkii geerida si dhab ah waanataas geeridaad ka cararaysay.

وَجَآءَتْ سَكْرَةُ ٱلْمَوْتِ بِٱلْحَقِّ ۖ ذَٰلِكَ مَا كُنتَ مِنْهُ تَحِيدُ ﴿١٩﴾

20. Suurkii (qiyaamana) waa la afuufi waana maalin laysu yaboohay (oo sugan).

وَنُفِخَ فِى ٱلصُّورِ ۚ ذَٰلِكَ يَوْمُ ٱلْوَعِيدِ ﴿٢٠﴾

وَجَآءَتْ كُلُّ نَفْسٍ مَّعَهَا سَآئِقٌ وَشَهِيدٌ ﴿٢١﴾

21. Naf walba way iman iyadoo malag hoggaamin midna ku marag furi.

لَّقَدْ كُنتَ فِى غَفْلَةٍ مِّنْ هَٰذَا فَكَشَفْنَا عَنكَ غِطَآءَكَ فَبَصَرُكَ ٱلْيَوْمَ حَدِيدٌ ﴿٢٢﴾

22. Waxaana loo odhan waad halmaansanaydeen arrintan (qiyaamada) waxaanna kaa faydnay daboolkii, araggaaguna maanta waa xoog badan yahay.

وَقَالَ قَرِينُهُۥ هَٰذَا مَا لَدَىَّ عَتِيدٌ ﴿٢٣﴾

23. Malaggii la xidhiidhayna wuxuu dhihi waa kan waana darban yahay, (kii lay xilsaaray).

أَلْقِيَا فِى جَهَنَّمَ كُلَّ كَفَّارٍ عَنِيدٍ ﴿٢٤﴾

24. Markaasaa lugu dhihi ku tuura naarta jahnnamo gaalnimo badane madax adag dhammaantiis.

مَّنَّاعٍ لِّلْخَيْرِ مُعْتَدٍ مُّرِيبٍ ﴿٢٥﴾

25. Oo khayrka reebid badan gardarraaloowna ah shakilowna ah.

ٱلَّذِى جَعَلَ مَعَ ٱللَّهِ إِلَٰهًا ءَاخَرَ فَأَلْقِيَاهُ فِى ٱلْعَذَابِ ٱلشَّدِيدِ ﴿٢٦﴾

26. Ee Alle miciisa ilaah kale yeelay, ku tuura caddibaad daran.

Dadka Alle ayaa abuuray, malaa'igna wuu u diray wax kastoo la camalfalana way qoraysaa Alle na waa ogyahay, dadkana waxaa ka dambeeya sakaraadka geerida, suurka qiyaamaha iyo xisaab, saa darteed waa in loo darbadaa siduu Nabigu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee): sidee u raaxaysan isagoo malaggii suurka afka uu saaray wajigana uu leexiyay uuna sugi in la idmo, markaasay dheheen Rasuulki Allow seen dhahnaa, markaasuu yidhi: dhaha: Alle ayaa kaafiyahannaga ah wakiilna isagaa u wanaagsan, Allaah ayaan tala saarannay. Tirmidi. **[Qaaf: 16-26].**

* قَالَ قَرِينُهُۥ رَبَّنَا مَآ أَطْغَيْتُهُۥ وَلَٰكِن كَانَ فِى ضَلَٰلٍۭ بَعِيدٍ ﴿٢٧﴾

27. Saaxiibkiisii (shaydaankiisii) wuxuu dhihi Rabbigeenow anigu ma dhuminnin laakiin isagaa baadi fog ku sugnaa.

28. Alle wuxuu dhihi ha ku murmina agtayda waan idiin hormariyay gooddigii.

قَالَ لَا تَخۡتَصِمُواْ لَدَيَّ وَقَدۡ قَدَّمۡتُ إِلَيۡكُم بِٱلۡوَعِيدِ ﴿٢٨﴾

29. Hadalna agtayda laguma baddalo mana dulmiyo addoommada.

مَا يُبَدَّلُ ٱلۡقَوۡلُ لَدَيَّ وَمَآ أَنَا۠ بِظَلَّٰمٖ لِّلۡعَبِيدِ ﴿٢٩﴾

30. Xusuusta maalinta aan u dhahayno naarta jahannama ma buuxsantay, oo markaa ay dhihi wax ma la ii siyaadin.

يَوۡمَ نَقُولُ لِجَهَنَّمَ هَلِ ٱمۡتَلَأۡتِ وَتَقُولُ هَلۡ مِن مَّزِيدٖ ﴿٣٠﴾

31. Jannadiina loo soo dhaweeyo kuwii dhawrsaday iyadoon ka fogayn.

وَأُزۡلِفَتِ ٱلۡجَنَّةُ لِلۡمُتَّقِينَ غَيۡرَ بَعِيدٍ ﴿٣١﴾

32. Waxaasina waa wixii loo yaboohay ruux kasta oo tawbadkeen badan oo dhawrid badan (ballanka Alle).

هَٰذَا مَا تُوعَدُونَ لِكُلِّ أَوَّابٍ حَفِيظٖ ﴿٣٢﴾

33. Ruuxii Allaha Raxmaan ah ka yaaba isagoon arkaynin, oo la yimaada qalbi toobadkeen badan.

مَّنۡ خَشِيَ ٱلرَّحۡمَٰنَ بِٱلۡغَيۡبِ وَجَآءَ بِقَلۡبٖ مُّنِيبٍ ﴿٣٣﴾

34. Waxaa lugu dhihi ku gala jannada nabdgalyo waana maalintii waariddee.

ٱدۡخُلُوهَا بِسَلَٰمٖۖ ذَٰلِكَ يَوۡمُ ٱلۡخُلُودِ ﴿٣٤﴾

35. Jannada waxay ka heli waxay doonaan, agtannadana waxaa ah siyaado (in Alle la arko).

لَهُم مَّا يَشَآءُونَ فِيهَا وَلَدَيۡنَا مَزِيدٞ ﴿٣٥﴾

36. Immisa ummadood ayaan halaagnay reer makaad ka hor oo kana xoogbadan iyagoo dhulka ku gagaddoomay, meel Alle looga cararana ma jirto.

وَكَمۡ أَهۡلَكۡنَا قَبۡلَهُم مِّن قَرۡنٍ هُمۡ أَشَدُّ مِنۡهُم بَطۡشٗا فَنَقَّبُواْ فِي ٱلۡبِلَادِ هَلۡ مِن مَّحِيصٍ ﴿٣٦﴾

إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَذِكۡرَىٰ لِمَن كَانَ لَهُۥ قَلۡبٌ أَوۡ أَلۡقَى ٱلسَّمۡعَ وَهُوَ شَهِيدٞ ﴿٣٧﴾

37. Waxaasina waa waanada ruuxii qalbi leh ama wax dhagaysan isagoo qalbigiisu joogo.

Saaxiibka xun wuu ku luggooyn, wuuna ku dhumin, marka dhib kugu dhacana wuu kaa tagi kaana carari sida shaydaanka, Alle na wax walba waa ogyahay muranna agtiisa ma yaallo, maxaa yeelay horuuba wax walba u caddeeyay cidnana ma dulmiyo, naarta jahannamana (Alle ha naga koriyee) waxay codsan in loo kordhiyo ehelkeeda, jannana waxaa loo soo dhaweyn kuwii Allahood dhabnimo uga yaabay, xumaantana ka dhawrsaday, ruuxii Alle oqoon ah, toobadna keena waxaa lagu abaal marin janno wax walba uu ka heli. Ee waa in lagu waana qaato ummadihii hore iyo waxay ku dambeeyen, xumaantana laga fogaado illeen Alle wax ka fakan kara ma jiree. **[Qaaf: 27-37].**

وَلَقَدۡ خَلَقۡنَا ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضَ وَمَا بَيۡنَهُمَا فِي سِتَّةِ أَيَّامٖ وَمَا مَسَّنَا مِن لُّغُوبٖ ﴿٣٨﴾

38. Dhab ahaan annagaa samaawaadka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya ku abuurray lix maalmood, wax daal ahna nama taabannin.

فَٱصۡبِرۡ عَلَىٰ مَا يَقُولُونَ وَسَبِّحۡ بِحَمۡدِ رَبِّكَ قَبۡلَ طُلُوعِ ٱلشَّمۡسِ وَقَبۡلَ ٱلۡغُرُوبِ ﴿٣٩﴾

39. Ku samir (Nabiyow) waxay sheegayaan, Alle na u tasbiixso adigoo ku mahadin qorrax soo bax ka hor iyo dhicidda ka hor.

وَمِنَ ٱلَّيۡلِ فَسَبِّحۡهُ وَأَدۡبَٰرَ ٱلسُّجُودِ ﴿٤٠﴾

40. Habeenkana qaar u tasbiixso iyo sujuudda dabadeed.

وَٱسۡتَمِعۡ يَوۡمَ يُنَادِ ٱلۡمُنَادِ مِن مَّكَانٖ قَرِيبٖ ﴿٤١﴾

41. Dhagayso maalinta uu ka dhawaaqi mid dhawaaqa meel dhaw.

يَوۡمَ يَسۡمَعُونَ ٱلصَّيۡحَةَ بِٱلۡحَقِّۚ ذَٰلِكَ يَوۡمُ ٱلۡخُرُوجِ ﴿٤٢﴾

42. Waa ay maqli qaylada oo dhab ah, waana maalinta soo bixidda.

إِنَّا نَحۡنُ نُحۡيِۦ وَنُمِيتُ وَإِلَيۡنَا ٱلۡمَصِيرُ ﴿٤٣﴾

43. Annagaa waxna noolaynna waxna dilla, xaggannagaana loo soo ahaan.

يَوۡمَ تَشَقَّقُ ٱلۡأَرۡضُ عَنۡهُمۡ سِرَاعٗاۚ ذَٰلِكَ حَشۡرٌ عَلَيۡنَا يَسِيرٞ ﴿٤٤﴾

44. Maalinta dhulku ka dillaaci iyagoo dagdagi, taasina waa soo kulmin noo fudud.

45. Annagaa og waxay dhihi, aduguna ma tihid mid qasbi oo xoog ku islaamin ee ku waani quraanka ruuxii Alle waciidkiisa (gooddigiisa) ka yaabi.

نَّحۡنُ أَعۡلَمُ بِمَا يَقُولُونَۖ وَمَآ أَنتَ عَلَيۡهِم بِجَبَّارٖۖ فَذَكِّرۡ بِٱلۡقُرۡءَانِ مَن يَخَافُ وَعِيدِ ٤٥

Cirka iyo dhulka iyo waxa khalqi ah ee ku dhexnoolba Alle ayaa abuuray, wax daaliyana ma jiro, waxaase loo baahan yahay ku xidhnida Alle adkaysi iyo cibaadadiisa oo la badiyo habeen iyo dharaarba. Maxaa yeelay waxaa imaan maalin dadka la kulmin oo qayla daran ka kor dhawaaqi, qubuurahana ay si dagdag ah uga soo bixi, Nabiguna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): "anaa ugu horrayn ruux dhulku ka dillaaco". Waxaa wariyay Muslim.

Alle ayaana wax nooleeya waxna dila, dadkuna isagay u ahaan, wax walbana waa u fudud yahay, waase in dadka la waaniyo si quruxsanna wax loogu sheego, illeen xoog wax kuma hanuunee, hallawna wax ma taree. **[Qaaf: 38-45].**

Suurat Ad-Daariyaat

سُورَةُ الذَّارِيَاتِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Alle wuxuu ku dhaartay dabaysha (carrada kicisa) kicin.

وَٱلذَّٰرِيَٰتِ ذَرْوًا ﴿١﴾

2. Iyo daruurta xambaarta culayska (roobka).

فَٱلْحَٰمِلَٰتِ وِقْرًا ﴿٢﴾

3. Iyo doonnida sida fudud u socota.

فَٱلْجَٰرِيَٰتِ يُسْرًا ﴿٣﴾

4. Iyo malaa'igta amarka qaybisa.

فَٱلْمُقَسِّمَٰتِ أَمْرًا ﴿٤﴾

5. Ee dadow waxa laydiinku goodin waa run.

إِنَّمَا تُوعَدُونَ لَصَادِقٌ ﴿٥﴾

6. Abaalmarintuna waa sugan tahay.

وَإِنَّ ٱلدِّينَ لَوَٰقِعٌ ﴿٦﴾

7. Samada yuu Alle ku dhaartay ee quruxda iyo waddooyinka leh.

وَٱلسَّمَآءِ ذَاتِ ٱلْحُبُكِ ﴿٧﴾

8. Ee dadow waxaad ku sugan tihiin hadal is khilaafsan.

إِنَّكُمْ لَفِى قَوْلٍ مُّخْتَلِفٍ ﴿٨﴾

9. Iimaankana waxaa laga iilaa ruux dhumay.

يُؤْفَكُ عَنْهُ مَنْ أُفِكَ ﴿٩﴾

10. Waxaana la nacladay beenaalayaasha.

قُتِلَ ٱلْخَرَّٰصُونَ ﴿١٠﴾

11. Ee ah kuwa xumaantooda (baadinnimadooda) ku dhex hilmaansan.

ٱلَّذِينَ هُمْ فِى غَمْرَةٍ سَاهُونَ ﴿١١﴾

12. Waxay waydiin goorta abaalmarinta (qiyaamada).

يَسْـَٔلُونَ أَيَّانَ يَوْمُ ٱلدِّينِ ﴿١٢﴾

13. Waana maalinta naarta lagu gubi.

يَوْمَ هُمْ عَلَى ٱلنَّارِ يُفْتَنُونَ ﴿١٣﴾

14. Laguna dhihi dhadhamiya caddibaaddii aad dadajisanayseen.

ذُوقُواْ فِتْنَتَكُمْ هَٰذَا ٱلَّذِى كُنتُم بِهِۦ تَسْتَعْجِلُونَ ﴿١٤﴾

Sida aayado badan sheegeen Alle wuxuu ku dhaartaa wax badan oo khalqigiisa ka mid ah. Xaqna wuu u leeyahay, waxayna ku tusin adkaynta waxa la sheegi, sida qiyaamada, xisaabta iyo abaalmarinta.

Jidka toosanna waxaa ka leexda kuwa xaqa isu diida ee beenaalayaasha ah, xumaantana dhexdabaasha, qiyaamada iyo soo bixintana si xun u waydiiya, waxaase lagu abaalmarin naar daran, saas daraadeed waxaa waajib ah in jidka toosan la qaado ee jannada aadaya, jidka xunna laga leexdo ee jahannama u baxa. **[Ad-Daariyaat: 1-14].**

15. Kuwa dhawrsaday waxay ku sugnaan jannooyin iyo ilo.

إِنَّ ٱلْمُتَّقِينَ فِى جَنَّٰتٍ وَعُيُونٍ ﴿١٥﴾

16. Iyagoo qaadan waxa Alle siiyay, maxaa yeelay waxay ahaayeen horay kuwo wanaag fala.

ءَاخِذِينَ مَآ ءَاتَىٰهُمْ رَبُّهُمْ ۚ إِنَّهُمْ كَانُواْ قَبْلَ ذَٰلِكَ مُحْسِنِينَ ﴿١٦﴾

17. Waxayna ahaayeen kuwo wax yar habeenkii seexda.

كَانُواْ قَلِيلًا مِّنَ ٱلَّيْلِ مَا يَهْجَعُونَ ﴿١٧﴾

18. Waagana way dambi dhaaf waydiisanayeen.

وَبِٱلْأَسْحَارِ هُمْ يَسْتَغْفِرُونَ ﴿١٨﴾

19. Xoolohoodana xaq bay ku leeyihiin kuwa waydiista iyo ka dhibaataysan (ee rizqiga laga hoojiyay).

وَفِىٓ أَمْوَٰلِهِمْ حَقٌّ لِّلسَّآئِلِ وَٱلْمَحْرُومِ ﴿١٩﴾

20. Dhulkana waxaa ugu sugan calaamooyin kuwa wax yaqiinin.

وَفِى ٱلْأَرْضِ ءَايَٰتٌ لِّلْمُوقِنِينَ ﴿٢٠﴾

21. (abuuridda) naftiinna (calaamooyin ayaa idinku

وَفِىٓ أَنفُسِكُمْ ۚ أَفَلَا تُبْصِرُونَ ﴿٢١﴾

sugan), miyaydaan arkaynin (waana qaadasho).

22. Samada yuuna jiraa risqigiinnu iyo waxa laydiin yaboohi.

وَفِي ٱلسَّمَآءِ رِزۡقُكُمۡ وَمَا تُوعَدُونَ ﴿٢٢﴾

23. Allaha cirka iyo dhulka yaan ku dhaarannaye waxa quraanku sheegi waa sugan yahay sida hadalkiinna oo kale.

فَوَرَبِّ ٱلسَّمَآءِ وَٱلۡأَرۡضِ إِنَّهُۥ لَحَقّٞ مِّثۡلَ مَآ أَنَّكُمۡ تَنطِقُونَ ﴿٢٣﴾

Sama fale Alle wuxuu ka abaalmariyaa wanaag iyo janno, waxaana ka mid ah kuwa habeenkii cibaadaysta dadkoo hurda', siduu Nabigu yidhi (ammaan iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) «dadow wax quudiya, qaraabadana xidhiidhiya, salaantana faafiya, habeenkiina tukada dadkoo hurda jannada aad ku gasheen nabadgalyee». Tirmidi iyo Ibnu Maajah.

Iyo kuwa aroorta Alle dambi dhaaf warsada, xoolohoodana xaq ka bixiya, kuna waana qaata dhulka iyo naftoodaba, sida oo kale cirka siduu Alle u habeeyay. Saa daraadeed waa in Alle laga yaabo wuxuu ballanqaadayna la rumeeyo illeen waa dhab sida hadalkoodee. **[Ad-Daariyaat: 15-23].**

24. Ma ku soo gaadhay warkii martidii (Nabi) Ibraahiim ee sharafta lahayd.

هَلۡ أَتَىٰكَ حَدِيثُ ضَيۡفِ إِبۡرَٰهِيمَ ٱلۡمُكۡرَمِينَ ﴿٢٤﴾

25. Markay salaameenna, isna uu salaantii ka celiyey kuna yidhi waxaad tihiin kuwo aan la oqoonnin.

إِذۡ دَخَلُواْ عَلَيۡهِ فَقَالُواْ سَلَٰمٗاۖ قَالَ سَلَٰمٞ قَوۡمٞ مُّنكَرُونَ ﴿٢٥﴾

26. Markaasuu aaday ehelkiisii lana yimid dibi shilis (oo cayilan, una gawracay).

فَرَاغَ إِلَىٰٓ أَهۡلِهِۦ فَجَآءَ بِعِجۡلٖ سَمِينٖ ﴿٢٦﴾

27. Una soo dhaweeyay isagoo ku leh maxaad u cuni waydeen.

فَقَرَّبَهُۥٓ إِلَيۡهِمۡ قَالَ أَلَا تَأۡكُلُونَ ﴿٢٧﴾

28. Wuxuuna naftiisa ka kasay cabsi xaggooda ah, waxayna ku dheheen ha cabsanin, waxayna ugu bishaareeyeen wiil cilmi yeelan.

فَأَوۡجَسَ مِنۡهُمۡ خِيفَةٗۖ قَالُواْ لَا تَخَفۡۖ وَبَشَّرُوهُ بِغُلَٰمٍ عَلِيمٖ ﴿٢٨﴾

29. Markaasay soo qaabishay haweenaydiisii iyadoo qaylyi wajigana garaaci, waxayna tiri: ma habar madhalays ah (yaa wax dhali).

فَأَقْبَلَتِ ٱمْرَأَتُهُۥ فِى صَرَّةٍ فَصَكَّتْ وَجْهَهَا وَقَالَتْ عَجُوزٌ عَقِيمٌ ﴿٢٩﴾

30. Waxayna ku dheheen sidaasoo kale ayuu yiri Rabbigaa, Alle na waa mid fal san oo wax walba og.

قَالُوا۟ كَذَٰلِكِ قَالَ رَبُّكِ ۖ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلْحَكِيمُ ٱلْعَلِيمُ ﴿٣٠﴾

31. (Nabi Ibraahim) wuxuu ku yidhi xaalkiinnu see yahay kuwayohow la soo diray.

* قَالَ فَمَا خَطْبُكُمْ أَيُّهَا ٱلْمُرْسَلُونَ ﴿٣١﴾

32. Waxayna dheheen waxaa lanoo soo diray qoon dambiilayaal ah.

قَالُوٓا۟ إِنَّآ أُرْسِلْنَآ إِلَىٰ قَوْمٍ مُّجْرِمِينَ ﴿٣٢﴾

33. Si aan ugu soo dirro korkooda dhagaxyo dhoobo (kulul).

لِنُرْسِلَ عَلَيْهِمْ حِجَارَةً مِّن طِينٍ ﴿٣٣﴾

34. Oo Alle agtiisa loogu calaameeyay kuwa xadgudbay.

مُّسَوَّمَةً عِندَ رَبِّكَ لِلْمُسْرِفِينَ ﴿٣٤﴾

35. Markaasaan ka bixinnay kuwii mu'miniinta ahaa oo ku dhex jiray.

فَأَخْرَجْنَا مَن كَانَ فِيهَا مِنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٣٥﴾

36. Kamana aannaan helin waxaan hal guri oo muslin ah ahayn.

فَمَا وَجَدْنَا فِيهَا غَيْرَ بَيْتٍ مِّنَ ٱلْمُسْلِمِينَ ﴿٣٦﴾

37. Waxaanna kaga tagnay dhexdeeda calaamad (ay ku waana qaataan) kuwa ka cabsan caddibaad daran.

وَتَرَكْنَا فِيهَآ ءَايَةً لِّلَّذِينَ يَخَافُونَ ٱلْعَذَابَ ٱلْأَلِيمَ ﴿٣٧﴾

Qisada Nabi Ibraahim iyo martidiisa waxay kaloo ku soo aroortay suuradda huud iyo alxijr, martisoorka iyo is xurmayntuna waa dabeecad wanaagsan oo diinta islaamku farayso sida qisadana ka muuqata. Waxaa kale oo aayaduhu caddeeyeen in Alle awooddiisu baaxad-wayn tahay, oo cid duq ah iyo midaan dhali jirinba carruur ka beero, taasina waa naxariista Alle iyo deeqdiisa. Tan kale waa in Alle la oqoonsado luguna waana qaato tusaalooyinkiisa si uu inooga nabadgaliyo caddibaad daran. **[Ad-Daariyaat: 24-37].**

38. (Nabi) Muusana calaamo lagu waana qaatuu ahaa markaan u dirray fircoon isagoo wata xujo cad.

وَفِي مُوسَىٰٓ إِذْ أَرْسَلْنَٰهُ إِلَىٰ فِرْعَوْنَ بِسُلْطَٰنٍ مُّبِينٍ ﴿٣٨﴾

39. Wuuna jeedsaday isagoo la jira colkiisii, wuxuuna ku yidhi waa saaxir ama waa waalan yahay.

فَتَوَلَّىٰ بِرُكْنِهِۦ وَقَالَ سَٰحِرٌ أَوْ مَجْنُونٌ ﴿٣٩﴾

40. Markaasaan qabannay (ciqaabnay) isaga iyo askartiisiiba, waxaanna ku tuurray badda isagoo la dagaalay.

فَأَخَذْنَٰهُ وَجُنُودَهُۥ فَنَبَذْنَٰهُمْ فِى ٱلْيَمِّ وَهُوَ مُلِيمٌ ﴿٤٠﴾

41. Ree Caadna (calaamo lagu waana qaato yaa ku sugan) markaan ku dirray dabayl wax halaagta.

وَفِى عَادٍ إِذْ أَرْسَلْنَا عَلَيْهِمُ ٱلرِّيحَ ٱلْعَقِيمَ ﴿٤١﴾

42. Wax kasta oy martana ka dhigi wax tirtiran.

مَا تَذَرُ مِن شَىْءٍ أَتَتْ عَلَيْهِ إِلَّا جَعَلَتْهُ كَٱلرَّمِيمِ ﴿٤٢﴾

43. Ree Thamuudna (calaamo lagu waana qaato yaa ku sugan) markii lagu yidhi raaxaysta ilaa waqti.

وَفِى ثَمُودَ إِذْ قِيلَ لَهُمْ تَمَتَّعُوا۟ حَتَّىٰ حِينٍ ﴿٤٣﴾

44. Waxayna iska kibriyeen amarkii Alle, waxaana qabtay qaylo daran iyagoo eegi.

فَعَتَوْا۟ عَنْ أَمْرِ رَبِّهِمْ فَأَخَذَتْهُمُ ٱلصَّٰعِقَةُ وَهُمْ يَنظُرُونَ ﴿٤٤﴾

45. Mana ayna karin kicid, isumana ayna gargaarin.

فَمَا ٱسْتَطَٰعُوا۟ مِن قِيَامٍ وَمَا كَانُوا۟ مُنتَصِرِينَ ﴿٤٥﴾

46. (Nabi) Nuux qoomkiisiina waa halaagnay, waxayna ahaayeen kuwo faasiqiin ah.

وَقَوْمَ نُوحٍ مِّن قَبْلُ ۖ إِنَّهُمْ كَانُوا۟ قَوْمًا فَٰسِقِينَ ﴿٤٦﴾

Aayadahani waxay ka qisoon ummadihii hore ee beeniyay nabiyadoodii iyo rasuulladoodii iyo sida Alle u halligay markay xaqa diideen, waana wax lagu waana qaato lagana fogaado camalkoodii oo kale, waxay kaloo aayaduhu

caddayn in la ciqaabi dulmiile oo dhan, sida loo ciqaabay Fircoon iyo wixii la mid ahaa.

Waxaase taas u sii dheer caddibaaddii aakhiro ee wayneyd. **[Ad-Daariyaat: 38-46].**

47. Samada annagaa ku dhisnay xoog, waana waasicinnay.

وَٱلسَّمَآءَ بَنَيۡنَٰهَا بِأَيۡيْدٖ وَإِنَّا لَمُوسِعُونَ ﴿٤٧﴾

48. Dhulkana waan gogollay cid wax gogoshana annagaa u fiican (Alle).

وَٱلۡأَرۡضَ فَرَشۡنَٰهَا فَنِعۡمَ ٱلۡمَٰهِدُونَ ﴿٤٨﴾

49. Wax walbana waxaan ka abuurray laba nooc, si aad ugu waana qaadataan.

وَمِن كُلِّ شَيۡءٍ خَلَقۡنَا زَوۡجَيۡنِ لَعَلَّكُمۡ تَذَكَّرُونَ ﴿٤٩﴾

50. Ee Alle u carara (toobad keena), waxaana idiin ahay dige cade (muuqda).

فَفِرُّوٓاْ إِلَى ٱللَّهِۖ إِنِّي لَكُم مِّنۡهُ نَذِيرٞ مُّبِينٞ ﴿٥٠﴾

51. Hana yeelina Alle miciisa ilaah kale, waxaan idiin ahay dige cade.

وَلَا تَجۡعَلُواْ مَعَ ٱللَّهِ إِلَٰهًا ءَاخَرَۖ إِنِّي لَكُم مِّنۡهُ نَذِيرٞ مُّبِينٞ ﴿٥١﴾

52. Xaalku waa saas, gaaladii reemakaad ka horreysayna markastoo rasuul u yimaado waxay dhihi jireen waa saaxir ama waa waalan yahay.

كَذَٰلِكَ مَآ أَتَى ٱلَّذِينَ مِن قَبۡلِهِم مِّن رَّسُولٍ إِلَّا قَالُواْ سَاحِرٌ أَوۡ مَجۡنُونٌ ﴿٥٢﴾

53. Miyay isu dardaarmeen arrintaas, waase qoom xadgudbay.

أَتَوَاصَوۡاْ بِهِۦۚ بَلۡ هُمۡ قَوۡمٞ طَاغُونَ ﴿٥٣﴾

54. Ee Nabiyow iskaga jeedso xaggooda, ma tihid mid la dagaaliye (Alle agtiisa).

فَتَوَلَّ عَنۡهُمۡ فَمَآ أَنتَ بِمَلُومٖ ﴿٥٤﴾

55. Ee wax waani, waanaduna waxay anfici mu'miniintee.

وَذَكِّرۡ فَإِنَّ ٱلذِّكۡرَىٰ تَنفَعُ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ ﴿٥٥﴾

Cirka iyo dhulkuba waxay ku ahaadeen amarka Alle, isagaana abuurkooda hagaajiyay, wax walbana Alle wuxuu ka abuuray lammaane (lab iyo dhaddig)

sida uu u abuuray laba kala gaddisan, bad barri, macaan khadhaadh, habeen dharaar, lab iyo dhaddig iyo wixii la mid ah, wuxuuna u abuuray inuu ku intifaaco dadku, kuna waana qaato darteed, oo ay Alle xaggiisa u jeedsadaan, taasoo ah daacadiisa, iyo in isagoo kaliya la caabudo lagana fogaado falkii iyo hadalkii xumaa; ee kuwii hore ee xumaa. **[Ad-Daariyaat: 47-55].**

وَمَا خَلَقْتُ ٱلْجِنَّ وَٱلْإِنسَ إِلَّا لِيَعْبُدُونِ ﴿٥٦﴾

56. Jinni iyo insi waxaan cibaadadayda ahayn uma abuurin.

مَآ أُرِيدُ مِنْهُم مِّن رِّزْقٍ وَمَآ أُرِيدُ أَن يُطْعِمُونِ ﴿٥٧﴾

57. Kamana doonaayo risqi, iyo inay i quudiyaan.

إِنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلرَّزَّاقُ ذُو ٱلْقُوَّةِ ٱلْمَتِينُ ﴿٥٨﴾

58. Illeen Alle umbaa ah arsuqe xoogbadane.

فَإِنَّ لِلَّذِينَ ظَلَمُوا۟ ذَنُوبًا مِّثْلَ ذَنُوبِ أَصْحَٰبِهِمْ فَلَا يَسْتَعْجِلُونِ ﴿٥٩﴾

59. Kuwii dulmiilowga ahaa waxaa u sugnaaday qayb (ciqaab ah) oo la mid ah tii saaxiibbadoodii (ka horreeyey) ee ha dadajisannin.

فَوَيْلٌ لِّلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مِن يَوْمِهِمُ ٱلَّذِى يُوعَدُونَ ﴿٦٠﴾

60. Halaag wuxuu u sugnaaday kuwii gaaloobay maalintoodii (qiyaame) ee loogu yaboohay.

Aayadahan waxay caddayn in Alle u abuuray addoommadiisa inay caabudaan kaliya, ee uusan uga baahnayn wanaag iyo quud midna, «cibaadaduna» waa sida ashahaadada, salaadda, sakada, soonka, xajka, jahaadka, ammaanada, runta, deeqsinnimada iyo ku dhaqanka siday diintu farayso liibaanna lagu gaadho, aakharo iyo adduunba. Alle na wuxuu ku yidhi hadalkiisii qudsiga ahaa: (ibnu Aadamow cibaadadayda u kali noqo laabtaada aan ka buuxiyo hodontinnimee, faqrigana aan kaa awdee. Haddaadan sidaa falin laabtaada waxaan ka buuxin shuqul, faqrigana kaa awdi maayo). Waxaa wariyay imaamu Axmad iyo Tirmidi iyo Ibnu Maajah.

Waana in la ogaado in dulmiilowgu uu mari waddadii kuwii ka horreeyay ee daalimiinta ahaa, halaag iyo balaayana waxay u sugnaan maalinta qiyaame gaalo. **[Ad-Daariyaat: 56-60].**

Suurat Ad-Duur

سُورَةُ الطُّورِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. (Alle wuxuu ku dhaartay) duurisiina.

وَٱلطُّورِ ﴿١﴾

2. Iyo kitaabka la dhigay.

وَكِتَٰبٍ مَّسْطُورٍ ﴿٢﴾

3. Oo ku qoran warqado la fidiyay.

فِى رَقٍّ مَّنشُورٍ ﴿٣﴾

4. Iyo gurigii cammirraa (beytulmacmuur).

وَٱلْبَيْتِ ٱلْمَعْمُورِ ﴿٤﴾

5. Iyo saanqaafka la koryeelay (cirka).

وَٱلسَّقْفِ ٱلْمَرْفُوعِ ﴿٥﴾

6. Iyo baddii la kululeeyay.

وَٱلْبَحْرِ ٱلْمَسْجُورِ ﴿٦﴾

7. Ee caddibaadda Alle waa wax dhici (sugan).

إِنَّ عَذَابَ رَبِّكَ لَوَٰقِعٌ ﴿٧﴾

8. Wax celinna ma jiro.

مَّا لَهُۥ مِن دَافِعٍ ﴿٨﴾

9. Waxay dhici caddibaaddaas maalinta samadu wareegi.

يَوْمَ تَمُورُ ٱلسَّمَآءُ مَوْرًا ﴿٩﴾

10. Buuruhuna socon.

وَتَسِيرُ ٱلْجِبَالُ سَيْرًا ﴿١٠﴾

11. Halaagna waxaa iska leh maalintaas kuwa xaqa beeniyay.

فَوَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ﴿١١﴾

12. Ee ah kuwa tiimbashada xumaanta ku dhex ciyaari.

ٱلَّذِينَ هُمْ فِى خَوْضٍ يَلْعَبُونَ ﴿١٢﴾

13. Maalinta naarta xoog loogu tuurina (waxaa lagu dhihi).

يَوْمَ يُدَعُّونَ إِلَىٰ نَارِ جَهَنَّمَ دَعًّا ﴿١٣﴾

هَٰذِهِ ٱلنَّارُ ٱلَّتِي كُنتُم بِهَا تُكَذِّبُونَ ﴿١٤﴾

14. Waatan naartii aad beenin jirteen.

أَفَسِحْرٌ هَٰذَآ أَمْ أَنتُمْ لَا تُبْصِرُونَ ﴿١٥﴾

15. Ma sixirbaa, mase waxbaydaan arkayn.

ٱصْلَوْهَا فَٱصْبِرُوٓاْ أَوْ لَا تَصْبِرُواْ سَوَآءٌ عَلَيْكُمْۖ إِنَّمَا تُجْزَوْنَ مَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿١٦﴾

16. Gala, ama samra ama ha samrinee, waa isugu kiin mid, waxaa uun laydinka abaalmarin waxaad camal falayseen.

Alle wuxuu ku dhaaran makhluuqaadkiisa ku tusin qudradiisa, sida buurta duurisiina; kitaabka la dhawray, quraanka, beytulmacmuur, cirka, dhulka, badda iyo wixii la mid ah, intaas oo dhanna waxaa lagu xoojin in ciqaabta Alle oo uu xumaanlowga u darbay sugan tahay, wax reebina uusan jirin, maalinta qiyaamana xaq diidayaasha lagu abaal marin ciqaab daran, maxaa yeelay waxay ku madax adkaadeen oo dabbaasheen wabigii xumaanta, Allena ma dulmiyine iyagaa is dulmiyay. **[Ad-Duur: 1-16].**

إِنَّ ٱلْمُتَّقِينَ فِي جَنَّٰتٍ وَنَعِيمٍ ﴿١٧﴾

17. Kuwa Alle ka dhawrsaday waxay gali jannooyin iyo nicmo.

فَٰكِهِينَ بِمَآ ءَاتَىٰهُمْ رَبُّهُمْ وَوَقَىٰهُمْ رَبُّهُمْ عَذَابَ ٱلْجَحِيمِ ﴿١٨﴾

18. Iyaga oo ku raaxaysan waxa Alle siiyay, Rabbigoodna wuxuu ka dhawray caddibaadda jaxiimo.

كُلُواْ وَٱشْرَبُواْ هَنِيٓـًٔا بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿١٩﴾

19. (Waxaana lagu dhihi) cuna oo cabba idinkoo shifaysan camalkiinnii dartiis.

مُتَّكِـِٔينَ عَلَىٰ سُرُرٍ مَّصْفُوفَةٍۖ وَزَوَّجْنَٰهُم بِحُورٍ عِينٍ ﴿٢٠﴾

20. Idinkoo ku dangiiga sariiro la safay, waxaanna la xiriirin haween janno (xuuralcayn).

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَٱتَّبَعَتْهُمْ ذُرِّيَّتُهُم بِإِيمَٰنٍ أَلْحَقْنَا بِهِمْ ذُرِّيَّتَهُمْ وَمَآ أَلَتْنَٰهُم مِّنْ عَمَلِهِم مِّن شَىْءٍۚ كُلُّ ٱمْرِئٍۭ بِمَا كَسَبَ رَهِينٌ ﴿٢١﴾

21. Kuwa xaqa rumeeyay ee caruurtooduna iimaanka ku raacday waxaannu haleeshiin carruurtooda (darajada iyo naxariista), camalkoodana waxba kama nusqaaminayno, ruux walbana wuxuu kasbaday yuu u rahmanaan «u xidhnaani».

22. Waxaannu u badinnay faakiho iyo hilib oo ah waxay jecel yihiin.

وَأَمْدَدْنَٰهُم بِفَٰكِهَةٍ وَلَحْمٍ مِّمَّا يَشْتَهُونَ ﴿٢٢﴾

23. Waxayna isku siin jannada dhexdeeda (iyagoo sheekeysan) weel (khamra macaani) ka buuxdo, oon hadal xun iyo dambi midna lahayn.

يَتَنَٰزَعُونَ فِيهَا كَأْسًا لَّا لَغْوٌ فِيهَا وَلَا تَأْثِيمٌ ﴿٢٣﴾

24. Waxaana u adeegi wiilal aad mooddo jawhar la dhawray.

* وَيَطُوفُ عَلَيْهِمْ غِلْمَانٌ لَّهُمْ كَأَنَّهُمْ لُؤْلُؤٌ مَّكْنُونٌ ﴿٢٤﴾

Kuwa Alle caabuda xumaantana ka dhawrsada wuxuu Alle ku abaalmarin janno iyo wanaag, iyaga iyo carruurtoodii xaqa rumeeyayba, siduu Dabaraani ka wariyay Ibna Cabbaas inuu yidhi: waxaan u malayn Nabigu «ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee» inuu yidhi: (marka ruuxu jannada galo yuu warsadaa labadiisii waalid iyo haweenaydiisii iyo carruurtiisii markaasaa la dhihi ma ayan gaadhin darajadaada, markaasuu dhihi: Allow waxaan u camal falay naftayda iyo tooda, markaasaa la fari in la haleeshiiyo). Camal cid fashayna lagama nusqaamiyo, waxay ehlu jannuhu doonaanna waxay ka heli dhexdeeda, muran, hadal xun iyo dambina ma yaallo jannada dhexdeeda, ee waa uun wanaag nicmo iyo raaxo. **[Ad-Duur: 17-24].**

25. Qaarkood (ehlu-jannaha) yaa qaarka kale qaabila iyagoo wax is waydiin.

وَأَقْبَلَ بَعْضُهُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ يَتَسَآءَلُونَ ﴿٢٥﴾

26. Waxayna isu dheheen waxaan ahayn horey adduunkii kuwo ehelkoodii dhexdiisa ku cabsada.

قَالُوٓاْ إِنَّا كُنَّا قَبْلُ فِىٓ أَهْلِنَا مُشْفِقِينَ ﴿٢٦﴾

27. Alle ayaase nagu mannaystay (dambi dhaaf), wuxuuna naga dhawray caddibaadda samuumka (jahannama).

فَمَنَّ ٱللَّهُ عَلَيْنَا وَوَقَىٰنَا عَذَابَ ٱلسَّمُومِ ﴿٢٧﴾

28. Waxaan ahayn horay kuwo barya Alle, Ilaahayna waa baarri naxariista.

إِنَّا كُنَّا مِن قَبْلُ نَدْعُوهُ ۖ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلْبَرُّ ٱلرَّحِيمُ ﴿٢٨﴾

29. Ee waani (Nabiyow dadka), nicmada Rabbigaa darteed ma tihid wax sheege iyo waalane midnee.

فَذَكِّرْ فَمَآ أَنتَ بِنِعْمَتِ رَبِّكَ بِكَاهِنٍ وَلَا مَجْنُونٍ ﴿٢٩﴾

30. Mise waxay dhihi waa gabayaa ee aan la sugno geerida.

أَمْ يَقُولُونَ شَاعِرٌ نَّتَرَبَّصُ بِهِۦ رَيْبَ ٱلْمَنُونِ ﴿٣٠﴾

31. Waxaad dhahdaa suga anna waan idin la sugiye.

قُلْ تَرَبَّصُوا۟ فَإِنِّى مَعَكُم مِّنَ ٱلْمُتَرَبِّصِينَ ﴿٣١﴾

32. Mise caqligooda (xun) yaa saas (in ay u hadlaan) faray, ma aha ee waa qoom xadgudbay.

أَمْ تَأْمُرُهُمْ أَحْلَٰمُهُم بِهَٰذَآ أَمْ هُمْ قَوْمٌ طَاغُونَ ﴿٣٢﴾

33. Mise waxay dhihi isagaa abuurtay (quraanka), mayae waxba ma ayan rumeynin.

أَمْ يَقُولُونَ تَقَوَّلَهُۥ ۚ بَل لَّا يُؤْمِنُونَ ﴿٣٣﴾

34. Ha la yimaadeen hadal la mid ah hadday run sheegi.

فَلْيَأْتُوا۟ بِحَدِيثٍ مِّثْلِهِۦٓ إِن كَانُوا۟ صَٰدِقِينَ ﴿٣٤﴾

Ehlu-jannaha Alle ayaa u nicmeeyay, waxayna ku kulmi jannada dhexdeeda iyagoo is warsan dhibaatadii adduunka iyo say Alle uga cabsan jireen iyo siduu ugu naxariistay wanaagna ugu mannaystay, maxaa yeelay Ilaahay waa samafale, tan kale Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) waa raxmad Alle soo diray, jirro, waalli, iyo wax xumaan ahna ma qabo, quraankuna waa kalaamkii Alle, haddii kale ha keeneen gaaladu iyo beenaalayaashu wax hadalkii la mid ah ama ku soo dhaw, lagama yaabo taasna waligeed. **[Ad-Duur: 25-34].**

35. Mise waxaa la abuuray, abuure la'aan, mise iyagaa abuuray (naftooda).

أَمْ خُلِقُوا۟ مِنْ غَيْرِ شَىْءٍ أَمْ هُمُ ٱلْخَٰلِقُونَ ﴿٣٥﴾

36. Mise iyagaa samaawaadka iyo dhulka abuuray, saas ma aha ee wax ma ayan yaqiininin.

أَمْ خَلَقُوا۟ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ ۚ بَل لَّا يُوقِنُونَ ﴿٣٦﴾

37. Mise agtoodaa khayraadka Alle yaallaa, mise iyagaa xisaabin dadka.

أَمْ عِندَهُمْ خَزَآئِنُ رَبِّكَ أَمْ هُمُ ٱلْمُصَيْطِرُونَ ﴿٣٧﴾

38. Mise waxay leeyihiin sallaan ay wax ku dhageeystaan, ha la yimaado kooda wax dhaagaystay xujo cad.

أَمْ لَهُمْ سُلَّمٌ يَسْتَمِعُونَ فِيهِ ۖ فَلْيَأْتِ مُسْتَمِعُهُم بِسُلْطَٰنٍ مُّبِينٍ ﴿٣٨﴾

39. Mise Alle ayaa gabdho u sugnaaday idinkana wiilal.

أَمْ لَهُ ٱلْبَنَٰتُ وَلَكُمُ ٱلْبَنُونَ ﴿٣٩﴾

40. Mise waxaad warsan Nabiyow ujuuro, oo markaas ku cuslaatay.

أَمْ تَسْـَٔلُهُمْ أَجْرًا فَهُم مِّن مَّغْرَمٍ مُّثْقَلُونَ ﴿٤٠﴾

41. Mise waxa maqanbaa agtooda ah oo ay qoraan.

أَمْ عِندَهُمُ ٱلْغَيْبُ فَهُمْ يَكْتُبُونَ ﴿٤١﴾

42. Mise dhagar bay rabaan, kuwa gaaloobay iyagaa dhakran.

أَمْ يُرِيدُونَ كَيْدًا ۖ فَٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ هُمُ ٱلْمَكِيدُونَ ﴿٤٢﴾

43. Mise ilaah Alle ka soo hadhay leeyihiin, Alle ayaa ka fog waxay la wadaajiyeen «ilaahnimada».

أَمْ لَهُمْ إِلَٰهٌ غَيْرُ ٱللَّهِ ۚ سُبْحَٰنَ ٱللَّهِ عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿٤٣﴾

Aayadahan waxay waran dilaa ah ku yihiin dhuunta gaalada mulxidiinta ah iyo diinlaawayasha diidi oo inkiri Ilaaheenna wayn ee sharafta leh ee abuuray caalamka iyo wax kasta, kuwaas doqommada ah ee isla waynida ku darsaday waxay inkiri Ilaaheen iyo abuurkiisa. Aayaduhuna waxay la hadli ciddii wax yar oo fikir ah ama caqli ah ku jirto, maxaa yeelay khalqiga, dad leh, cir leh ee dhul leh, ee bad leh ee xiddigo leh ee xayawaan leh waxayna ka baxsanayn saddex xaalo midkood:

1. *Inay iska abuurmeen khaaliq abuuray la'aan.*
2. *Inay iyagu is abuureen naftooda.*
3. *Iyo in cid kale abuurtay oo ahaysiisay, tan hore iyo tan labaadba waa wax kama jiraan, cid is abuurtayna ma jirto, mid iska abuurantayna ma jirto, wixii wax garad ahna ama caqli lehna saasuu rumaynsan yahay, waxaa soo hadhay tan sadexaad oo ah in cid wax abuurtay jirto oo makhluuqaadka ka duwan, waana arrin dhab ah, waana Ilaaheenna caalamka ahaysiiyay xaggiisana u ahaan, awoodna ku dhammaato, mu'miniintuna ay rumaysan yihiin, wanaagna ku abaalmarin.*

Bukhaari iyo Muslim waxay ka wariyeen Jubayr binu Mudhcim inuu yidhi: waxaan maqlay Nabiga oo makhrib akhrin (suuradda) duur markuu gaadhay aayaddan (mise waxaa la abuuray abuure la'aan): qalbigaygu wuxuu u dhawaaday inuu duulo. **[Ad-Duur: 35-43].**

وَإِن يَرَوْا۟ كِسْفًا مِّنَ ٱلسَّمَآءِ سَاقِطًا يَقُولُوا۟ سَحَابٌ مَّرْكُومٌ ﴿٤٤﴾

44. Hadday arkaan goosin ka mid ah samada oo soo dhacaysa waxay odhan waa daruuro is dulsaaran (madax adayg dartiis).

فَذَرْهُمْ حَتَّىٰ يُلَٰقُوا۟ يَوْمَهُمُ ٱلَّذِى فِيهِ يُصْعَقُونَ ﴿٤٥﴾

45. Ee iskaga tag Nabiyow intay kala kulmaan maalinta dhexdeeda lagu halaagi doono.

يَوْمَ لَا يُغْنِى عَنْهُمْ كَيْدُهُمْ شَيْـًٔا وَلَا هُمْ يُنصَرُونَ ﴿٤٦﴾

46. Maalinta ayan dhagartoodu wax u taraynin wax u gargaarana uusan jirin.

وَإِنَّ لِلَّذِينَ ظَلَمُوا۟ عَذَابًا دُونَ ذَٰلِكَ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٤٧﴾

47. Kuwa xad gudbay waxaa u sugnaaday caddibaad ka sokaysa (qiyaamada), laakiin badankoodu ma oga.

وَٱصْبِرْ لِحُكْمِ رَبِّكَ فَإِنَّكَ بِأَعْيُنِنَا ۖ وَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ حِينَ تَقُومُ ﴿٤٨﴾

48. Ee ku samir xukunka Rabbigaa (Nabiyow) annagaa ku ilaalinaynee, kuna tasbiixso oo ku mahadi Allehaa markaad kici.

وَمِنَ ٱلَّيْلِ فَسَبِّحْهُ وَإِدْبَٰرَ ٱلنُّجُومِ ﴿٤٩﴾

49. Habeenka qaarkiisna tuko, iyo marka xiddiguhu jeedsadaan.

Madax adayggu gaalo wax u tari mahayo marka ciqaabta Alle timaaddo, khiyaamo, dhagar iyo xumaanna Alle wax kama dhibto, ee waxay wax yeeli cidda la timid uun, adduunkana Alle waa karaa inuu ku ciqaabo xumaanlowga (sida dhacda in badan), aakhirana waa u dheer tahay ciqaabteedii, waxaase Alle Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) faray ummaddiisuna waa la mide inuusan u walbahaarin xumaanlowga ee uu xaqa tusaa, kuna samraa, kaddibna wax kama dhibayso ciddii dhunta, maxaa yeelay Alle ayaa awoodda leh, waana in tasbiixda Alle, mahaddiisa, salaadda iyo ka yaabiddiisana la badiyo si kastoo la yahayba. **[Ad-Duur: 44-49].**

Suurat An-Najm

سُورَةُ النَّجۡمِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Wuxuu ku dhaartay (Alle) xiddiggu markuu hoobto.

وَٱلنَّجۡمِ إِذَا هَوَىٰ ١

2. Ee saaxiibkiin (Nabigu) ma dhumin, xaqana kama leexan.

مَا ضَلَّ صَاحِبُكُمۡ وَمَا غَوَىٰ ٢

3. Kamana hadlo hawadiisa.

وَمَا يَنطِقُ عَنِ ٱلۡهَوَىٰٓ ٣

4. Quraankuna waxaan waxyi Alle ahayn ma aha.

إِنۡ هُوَ إِلَّا وَحۡيٞ يُوحَىٰ ٤

5. Waxaana wax baray (oo xagga Alle ka soo gaadhsiiyay) ku xoog wayn, (malaku Jibriil).

عَلَّمَهُۥ شَدِيدُ ٱلۡقُوَىٰ ٥

6. Ee qurux iyo quwaba leh, wuuna ekaaday.

ذُو مِرَّةٖ فَٱسۡتَوَىٰ ٦

7. Wuxuuna joogay jihadii sare (Jibriil).

وَهُوَ بِٱلۡأُفُقِ ٱلۡأَعۡلَىٰ ٧

8. Kaddibna u soo dhawaaday kuna soo hoobtay (Nabiga).

ثُمَّ دَنَا فَتَدَلَّىٰ ٨

9. Intuu uga jirsado qaddarka laba qaanso ama ka dhaw.

فَكَانَ قَابَ قَوۡسَيۡنِ أَوۡ أَدۡنَىٰ ٩

10. Wuxuuna Alle u waxyooday addoonkiisa (Nabiga) wuxuu u waxyooday.

فَأَوۡحَىٰٓ إِلَىٰ عَبۡدِهِۦ مَآ أَوۡحَىٰ ١٠

Alle wuxuu ku dhaartaa wuxuu doono oo khalqigiisa ka mid ah, addoomadiisuna kuma dhaartaan waxaan isaga ahayn, siduu sheegay imaam Shacbi. Alle na wuxuu halkan ku dhaartay xiddiggu markuu hooban, in Nabigu toosan yahay, xaqna ku hadlo wuxuu sheegina uu yahay wax Alle ku soo dajiyay uguna soo dhiibay malaku Jibriil, Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) had iyo jeer marka waxyi soo dagi wuxuu la kulmi jiray malaku Jibriil, taasina waxay tummaato ku tahay gaalada iyo xaq diidayaasha diidi xaqnimada quraanka.

Nabiguna (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) wuxuu yidhi: «anugu kuma hadlo waxaan xaq ahayn». Waxaa wariyay imaam Axmad binu Xambal. **[An-Najm: 1-10].**

مَا كَذَبَ ٱلْفُؤَادُ مَا رَأَىٰٓ ﴿١١﴾

11. Qalbiguna ma beenin wuxuu arkay (Nabigu).

أَفَتُمَٰرُونَهُۥ عَلَىٰ مَا يَرَىٰ ﴿١٢﴾

12. Ee ma idinkaa kula murmi «kana doodi» wuxuu arkay.

وَلَقَدْ رَءَاهُ نَزْلَةً أُخْرَىٰ ﴿١٣﴾

13. Dhabnimuu Nabigu u arkay jibriil mar kale

عِندَ سِدْرَةِ ٱلْمُنتَهَىٰ ﴿١٤﴾

14. Sidratul-muntaha agteeda.

عِندَهَا جَنَّةُ ٱلْمَأْوَىٰٓ ﴿١٥﴾

15. Agteedana waxaa ah jannatulma'waa.

إِذْ يَغْشَى ٱلسِّدْرَةَ مَا يَغْشَىٰ ﴿١٦﴾

16. (Wuxuu arkay) waqtiguu daboolayay sidrada wax daboola.

مَا زَاغَ ٱلْبَصَرُ وَمَا طَغَىٰ ﴿١٧﴾

17. Aragguna kama iilan wuxuu arkay (Nabigu) mana xadgudbin.

لَقَدْ رَأَىٰ مِنْ ءَايَٰتِ رَبِّهِ ٱلْكُبْرَىٰٓ ﴿١٨﴾

18. Dhabnimo yuuna u arkay (Nabigu) aayado Alle oo waawayn.

أَفَرَءَيْتُمُ ٱللَّٰتَ وَٱلْعُزَّىٰ ﴿١٩﴾

19. Ka warrama (sanamyada) Laata iyo Cuza.

وَمَنَوٰةَ ٱلثَّالِثَةَ ٱلْأُخْرَىٰٓ ﴿٢٠﴾

20. Iya Manaatadii saddexaad ee kale.

أَلَكُمُ ٱلذَّكَرُ وَلَهُ ٱلْأُنثَىٰ ﴿٢١﴾

21. Idinku ma waxaad leedihiin lab Alle na dhaddigga.

تِلْكَ إِذًا قِسْمَةٌ ضِيزَىٰٓ ﴿٢٢﴾

22. Taasi waa qayb dulan ah.

إِنْ هِيَ إِلَّآ أَسْمَآءٌ سَمَّيْتُمُوهَآ أَنتُمْ وَءَابَآؤُكُم مَّآ أَنزَلَ ٱللَّهُ بِهَا مِن سُلْطَٰنٍ ۚ إِن يَتَّبِعُونَ إِلَّا ٱلظَّنَّ وَمَا تَهْوَى ٱلْأَنفُسُ ۖ وَلَقَدْ جَآءَهُم مِّن رَّبِّهِمُ ٱلْهُدَىٰٓ ﴿٢٣﴾

23. Sanammaduna magacyo aad magacowdeen idinka iyo aabayawgiin mooyeen wax kale ma aha, wax xuja ahna Alle uma soo dajinin, waxaan mala ahaynna ma raacayaan iyo waxa naftoodu doonto, xagga Allana waxaa uga yimid hanuun.

Nabigu (ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) wuxuu arkay malaku Jibriil oo soo gaadhsiinayay waxyiga Alle marar badan, sidaan (horayba u soo sheegnay) shakina kuma jiro siduu Nabigu Jibriil u arkay, sida oo kale wuxuu arkay Nabigu aayada waawayn oo Alle, maxayse sanamyo ama wax ha garteen ama yay wax garannine la caabudo ama la raaco tari, waa uun halaag iyo luggooyo, illeen xagga Ilaaheen baa waxaa inooga yimid nuur iyo hanuun ay waajib tahay in la raaco. **[An-Najm: 11-23].**

أَمْ لِلْإِنسَٰنِ مَا تَمَنَّىٰ ﴿٢٤﴾

24. Mise dadka waxaa u sugnaaday waxay yididiishaan.

فَلِلَّهِ ٱلْءَاخِرَةُ وَٱلْأُولَىٰ ﴿٢٥﴾

25. Aakhiro iyo adduunba Alle ayaa iska leh.

* وَكَم مِّن مَّلَكٍ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ لَا تُغْنِى شَفَٰعَتُهُمْ شَيْـًٔا إِلَّا مِنۢ بَعْدِ أَن يَأْذَنَ ٱللَّهُ لِمَن يَشَآءُ وَيَرْضَىٰٓ ﴿٢٦﴾

26. Badanaa malag samada ku sugan oon shafeecadiisu waxba anfacaynin in Alle u idmo mooyee (in ay u shafeecaan) cidduu doono oo ka raalli noqdo.

إِنَّ ٱلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِٱلْءَاخِرَةِ لَيُسَمُّونَ ٱلْمَلَٰٓئِكَةَ تَسْمِيَةَ ٱلْأُنثَىٰ ﴿٢٧﴾

27. Kuwa aan rumaynin aakhiro waxay malaai'gta ku magacaabi magac dhaddig.

وَمَا لَهُم بِهِۦ مِنْ عِلْمٍ ۖ إِن يَتَّبِعُونَ إِلَّا ٱلظَّنَّ ۖ وَإِنَّ ٱلظَّنَّ لَا يُغْنِى مِنَ ٱلْحَقِّ شَيْـًٔا ﴿٢٨﴾

28. Wax cilmi ahna uma laha, ee waxay raaci mala uun, malana xaqa wax kama taro.

29. Ee iskaga jeedso (Nabiyow) ruux ka tagay xuskayga (quraanka) oon doonin waxaan nolosha adduunka ahayn.

فَأَعۡرِضۡ عَن مَّن تَوَلَّىٰ عَن ذِكۡرِنَا وَلَمۡ يُرِدۡ إِلَّا ٱلۡحَيَوٰةَ ٱلدُّنۡيَا ﴿٢٩﴾

30. Kaasina waa garaadkooda aqooneed intuu gaadhay, Alle na waa ogyahay cidda ka dhuntay jidkiisa, waana ogyahay cidda hanuunsan.

ذَٰلِكَ مَبۡلَغُهُم مِّنَ ٱلۡعِلۡمِۚ إِنَّ رَبَّكَ هُوَ أَعۡلَمُ بِمَن ضَلَّ عَن سَبِيلِهِۦ وَهُوَ أَعۡلَمُ بِمَنِ ٱهۡتَدَىٰ ﴿٣٠﴾

Ruuxna siduu doona uun xaalku ma noqdo, ee waa sida amarka Alle ku fulo, maxaa yeelay aakharo iyo adduunba Alle ayaa iska leh, xataa malaa'igtu waxaan Alle fasixin ma samayn karto, cidna uma shafeeci karto idanka Alle mooyee.

Alle na siduu meelo badan oo quraanka ah ku sheegay uma baahna ehel iyo carruur midna, maxaa yeelay khalqiga dhammaantiisba isagaa iska leh, markaas maxay gaaladu u sheegi in malaa'igtu gabdho Alle yihiin, wax ma oga ee waxay ku socdaan male, muxuuse tari male.

Nabiguna (ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) wuxuu ku yidhi hadalkiisii saxiixa ahaa: (iska jira malaha, maluhu waa ka u beensan hadale).

Alle na wuxuu Nabiga faray inuusan ku daba luggo'in kuwa xaqa ka jeedsaday ee cilmigoodii ku koobtay adduunyo la daba ordaa uun. **[An-Najm: 24-30].**

31. Samaawaadka iyo dhulka waxa ku sugan Alle ayaa iska leh, si uu uga abaalmariyo kuwa xumaanta falay camalkoodii, ugana abaalmariyo kuwii wanaagga falay wanaag.

وَلِلَّهِ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلۡأَرۡضِ لِيَجۡزِيَ ٱلَّذِينَ أَسَٰٓـُٔواْ بِمَا عَمِلُواْ وَيَجۡزِيَ ٱلَّذِينَ أَحۡسَنُواْ بِٱلۡحُسۡنَى ﴿٣١﴾

32. Waana kuwa ka fogaada dambiga waawayn iyo xumaanta, wax yaryar mooyeen, Alle na waa waasac dambidhaafkiisu, wuuna idin ogyahay markuu idinka abuuray dhulka iyo markaad ku asturan tihiin uurka hooyadiin, ee naftiinna ha ammaanina Alle ayaa og cidda dhawrsashada badane.

ٱلَّذِينَ يَجۡتَنِبُونَ كَبَٰٓئِرَ ٱلۡإِثۡمِ وَٱلۡفَوَٰحِشَ إِلَّا ٱللَّمَمَۚ إِنَّ رَبَّكَ وَٰسِعُ ٱلۡمَغۡفِرَةِۚ هُوَ أَعۡلَمُ بِكُمۡ إِذۡ أَنشَأَكُم مِّنَ ٱلۡأَرۡضِ وَإِذۡ أَنتُمۡ أَجِنَّةٞ فِي بُطُونِ أُمَّهَٰتِكُمۡۖ فَلَا تُزَكُّوٓاْ أَنفُسَكُمۡۖ هُوَ أَعۡلَمُ بِمَنِ ٱتَّقَىٰٓ ﴿٣٢﴾

33. Ka warrama midka xaqa ka jeedsaday.
أَفَرَءَيْتَ ٱلَّذِى تَوَلَّىٰ ﴿٣٣﴾

34. Oo wax yar bixiyay inta kalana reebtay.
وَأَعْطَىٰ قَلِيلًا وَأَكْدَىٰٓ ﴿٣٤﴾

35. Ma agtiisaa cilmiga maqan yaallaa oo wuu arkaa.
أَعِندَهُۥ عِلْمُ ٱلْغَيْبِ فَهُوَ يَرَىٰٓ ﴿٣٥﴾

Mar hadduu Alle cirka, dhulka, iyo makhluuqaadka dhammaantiisba leeyahay, uuna cidwalba ka abaal marin falkeeda uuna addoomihiisa ka saamixi gafafka yaryar, oo naxariistiisu waasac tahay, wax walbana ogyahay marka ruuxa la abuuro iyo goorkastaba, soo ma wanaagsana in wanaagga lagu dadaalo, xumaanta, islawaynida, iyo naftii ammaankana laga fogaado.

Maxammad binu Camar Ibnu-Cadhaa'a wuxuu yidhi: (waxaan ku magacaabay gabadh tay ah: Barrata, markaasay igu tidhi Saynab binti Abii Salamata: Rasuulkii Alle wuxuu reebay magacan, adna waxaad ku magacawday Barrata, markaasuu Rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeele) yidhi: (naftiinna ha ammaanina Ilaahay waa ogyahay cidda baarriga ah oo idin ka midah) markaasay dheheen: maxaan ku magacawnaa? Wuxuuna yidhi: ku magacaaba Saynab. Waxaa wariyay Muslim. Wuxuuna Nabigu reebay in dadka ammaanta lagu badiyo, ee khayrka iyo wanaagga uun ha la badsado iyagaa ammaan ugu filane. **[An-Najm: 31-35].**

36. Miyaan looga warramin (dadka) wixii ku yiillay kitaabkii (Nabi Muuse).
أَمْ لَمْ يُنَبَّأْ بِمَا فِى صُحُفِ مُوسَىٰ ﴿٣٦﴾

37. Iyo kii (Nabi Ibraahimkii) ee oofiyay (wixii la faray).
وَإِبْرَٰهِيمَ ٱلَّذِى وَفَّىٰٓ ﴿٣٧﴾

38. Inaan nafna dambi naf kale qaadaynin.
أَلَّا تَزِرُ وَازِرَةٌ وِزْرَ أُخْرَىٰ ﴿٣٨﴾

39. Ruuxna wuxuusan camalfalin heleeynin.
وَأَن لَّيْسَ لِلْإِنسَٰنِ إِلَّا مَا سَعَىٰ ﴿٣٩﴾

40. Camalkiisana la arki doono.
وَأَنَّ سَعْيَهُۥ سَوْفَ يُرَىٰ ﴿٤٠﴾

41. Ka dibna looga abaalmarin doono si buuxda.
ثُمَّ يُجْزَىٰهُ ٱلْجَزَآءَ ٱلْأَوْفَىٰ ﴿٤١﴾

42. Alle ayaa xaggiisana loo ahaan.
وَأَنَّ إِلَىٰ رَبِّكَ ٱلْمُنتَهَىٰ ﴿٤٢﴾

43. Alle waa kan wax ka qosliya kana oohiya.
وَأَنَّهُۥ هُوَ أَضْحَكَ وَأَبْكَىٰ ﴿٤٣﴾

44. Isagaana wax dila waxna nooleeya.

وَأَنَّهُۥ هُوَ أَمَاتَ وَأَحۡيَا ﴿٤٤﴾

45. Isagaana abuuray labada nooc ee ah lab iyo dhaddigba.

وَأَنَّهُۥ خَلَقَ ٱلزَّوۡجَيۡنِ ٱلذَّكَرَ وَٱلۡأُنثَىٰ ﴿٤٥﴾

46. Kana ahaysiiyay dhibic soo baxday.

مِن نُّطۡفَةٍ إِذَا تُمۡنَىٰ ﴿٤٦﴾

47. Isagaana ahaysiin soo celinta kale.

وَأَنَّ عَلَيۡهِ ٱلنَّشۡأَةَ ٱلۡأُخۡرَىٰ ﴿٤٧﴾

48. Alle isagaa wax hodmiya isagaana wax faqiiriya.

وَأَنَّهُۥ هُوَ أَغۡنَىٰ وَأَقۡنَىٰ ﴿٤٨﴾

49. Waana Rabbiga xiddigga shicra.

وَأَنَّهُۥ هُوَ رَبُّ ٱلشِّعۡرَىٰ ﴿٤٩﴾

Aayadahani waxay caddayn sida aayado badan oo kalaba in naf walba laga abaalmarin waxay camal fasho, nafna naf kale dambigeed ayna qaadaynin, ruux walbana uu arki camalkiisa, xaalkuna wuxuu ku dhammaan Alle xaggiisa.

Camar binu Maymuun waxaa laga wariyay inuu yidhi: waxaa na dhex istaagay Macaad binu Jabal wuxuuna yidhi: ree Awdoow waxaan ahay farriintii Rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) idiin soo diray, waadna ogtihiin in Alle loo ahaan, ama janno ama naar, waxaa wariyay Ibnu abii Xaatim.

Alle na waa ka qosliyaha, ka oohiyaha, dilaha, nooleeyaha, abuuraha, soo celiyaha, hodmiyaha, faqiiriyaha, iyo Rabbiga makhluuqaadka dhammaantood, ee waa in ruux walba uu u darbadaa inuu la kulmi camalkiisa, macaan iyo khadhaadhba. **[An-Najm: 36-49].**

50. Alle isagaa halaagay caadkii hore.

وَأَنَّهُۥٓ أَهۡلَكَ عَادًا ٱلۡأُولَىٰ ﴿٥٠﴾

51. Iyo thamuudba waxna kama reebin.

وَثَمُودَاْ فَمَآ أَبۡقَىٰ ﴿٥١﴾

52. (Nabi Nuux) qoomkiisiina horuu (u halaagay), waxayna ahaayeen kuwa dulmi badan oo xadgudub badan.

وَقَوۡمَ نُوحٖ مِّن قَبۡلُۖ إِنَّهُمۡ كَانُواْ هُمۡ أَظۡلَمَ وَأَطۡغَىٰ ﴿٥٢﴾

53. Qoomkii (Nabi Luudna) wuu riday (Alle) (oo daba geddiyay).

وَٱلۡمُؤۡتَفِكَةَ أَهۡوَىٰ ﴿٥٣﴾

فَغَشَّىٰهَا مَا غَشَّىٰ ﴿٥٤﴾

54. Wuxuuna ku daboolay wuxuu ku daboolay (oo caddibaad ah).

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكَ تَتَمَارَىٰ ﴿٥٥﴾

55. Teebaadse nicmooyinka Alle shakinaysaan (kana doodaysaan) dadow.

هَٰذَا نَذِيرٌ مِّنَ ٱلنُّذُرِ ٱلْأُولَىٰٓ ﴿٥٦﴾

56. Kan (Nabiga iyo quraankuba) waa dige ka mid ah u digayaashii hore.

أَزِفَتِ ٱلْآزِفَةُ ﴿٥٧﴾

57. Wayna dhawaatay saacaddi qiyaame.

لَيْسَ لَهَا مِن دُونِ ٱللَّهِ كَاشِفَةٌ ﴿٥٨﴾

58. Wax Alle ka soo hadhay oo ogna ma jiro (markay dhici).

أَفَمِنْ هَٰذَا ٱلْحَدِيثِ تَعْجَبُونَ ﴿٥٩﴾

59. Ma quraankanaad la yaabban tihiin.

وَتَضْحَكُونَ وَلَا تَبْكُونَ ﴿٦٠﴾

60. Ood qoslaysaan (idinkoo beenin) oydaanna ooyeynin (cabsi darteed).

وَأَنتُمْ سَٰمِدُونَ ﴿٦١﴾

61. Idinkoo waliba hilmaansan (islana wayn).

فَٱسْجُدُوا۟ لِلَّهِ وَٱعْبُدُوا۟ ۩ ﴿٦٢﴾

62. Ee dadow Alle u sujuuda caabudana.

Alle awooddiisa yaa wax walba ku jiraa, hadduu doonana wuu halaagaa cidduu doono sida kuwaas quraanku in badan ka warramay oo kale, maxaa yeelay way kibreen, nicmada Alle na way beeniyeen iyo xaqaba, saas daraaddeed waa in Alle laga yaabo, qiyaamadana loo darbado, quraankana la rumeeyo, kibir, isla wayni iyo qosol xaq ku beeninna la iska jiro, sujuudda Alle iyo cibaadadiisana la badiyaa, iyo xumaantaada oo laga ooyaa. Ibni Cabbaas wuxuu yidhi: waxaa sujuuday Nabiga (ammaan iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) (markuu akhriyay) «an-najm» waxaana la sujuuday muslimiintii, mushrikiintii, jinni iyo insiba .Waxaa wariyay Bukhaari. **[An-Najm: 50-62].**

Suurat Al-Qamar

سُورَةُ ٱلْقَمَرِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaa dhawaatay saacaddii (qiyaame), dayixiina wuu dillaacay.

ٱقْتَرَبَتِ ٱلسَّاعَةُ وَٱنشَقَّ ٱلْقَمَرُ ﴿١﴾

2. Hadday gaaladu arkaan aayad way ka jeedsadaan waxayna dhahaan waa sixir tagi.

وَإِن يَرَوْا۟ ءَايَةً يُعْرِضُوا۟ وَيَقُولُوا۟ سِحْرٌ مُّسْتَمِرٌّ ﴿٢﴾

3. Way beeniyeen (Nabiga iyo xaqa) waxayna raaceen hawadooda, amar kastana wuxuu leeyahay meel uu ku sugnaado.

وَكَذَّبُوا۟ وَٱتَّبَعُوٓا۟ أَهْوَآءَهُمْ ۚ وَكُلُّ أَمْرٍ مُّسْتَقِرٌّ ﴿٣﴾

4. Waxaana ugu yimid dhab ahaan warar ku dheehan waano.

وَلَقَدْ جَآءَهُم مِّنَ ٱلْأَنۢبَآءِ مَا فِيهِ مُزْدَجَرٌ ﴿٤﴾

5. Waana xigmad xeel dheer, maxaysa tari udigidi.

حِكْمَةٌۢ بَٰلِغَةٌ ۖ فَمَا تُغْنِ ٱلنُّذُرُ ﴿٥﴾

6. Ee iskaga jeedso (sugna) maalinta mid dhawaaqaa uu ugu yeedhi wax daran.

فَتَوَلَّ عَنْهُمْ ۘ يَوْمَ يَدْعُ ٱلدَّاعِ إِلَىٰ شَىْءٍ نُّكُرٍ ﴿٦﴾

7. Araggooduna wuu dullaysnaan, waxayna ka soo bixi qubuurahooda iyagood moodid ayax faafay.

خُشَّعًا أَبْصَٰرُهُمْ يَخْرُجُونَ مِنَ ٱلْأَجْدَاثِ كَأَنَّهُمْ جَرَادٌ مُّنتَشِرٌ ﴿٧﴾

8. Iyagoo u dagdagi dhawaaqaha xaggiisa, waxayna dhihi gaaladu kani waa maalin daran.

مُّهْطِعِينَ إِلَى ٱلدَّاعِ ۖ يَقُولُ ٱلْكَٰفِرُونَ هَٰذَا يَوْمٌ عَسِرٌ ﴿٨﴾

Calaamooyinka qiyaamada waxaa ka mid ah soo bixintii (Nabiga) (ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee).

Gaaladuna wax kastoo ku tusin xaqnimada (Nabiga) «oy arkaanba way beeninayeen, iyagoo sixir iyo xumaanba ku sheegi, wax walbase meel uu ku dhammaaduu leeyahay, waase in la waana qaato lana raaco xigmada quraanku sheegi inta ka horraysa qiyaamada iyo abaalmarinta loona darbado maalintaas wayn.

Waxaa laga wariyay Khaalid Binu Cumayr inuu yidhi: waxaa khudbad noo akhriyay Rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) Alle ayuuna ku mahadiyay kor ahaaye, wuuna ammaanay waxuuna yidhi: (intaa ka dib adduunyadii waxay ogaysiisay goyn, wayna jeedsatay, kamana hadhin wax yar mooyee oo la mid ah weel wax ku hadhay oo ruuxu qaadanayo, waadna ka guuraysaan xaggeeda una guuraysaan daar aan tagaynin, ee ka guura idinkoo wata camalkiinna khayrka badan, waxaa naloo sheegay in dhagax lagu tuuray salka jahannamo uuna sii socon toddoobaatan sano isagoon salka gaadhin, wallaahi in la buuxin, ma la yaabteen? Wallaahi waxaa naloo sheegay in jannada labadeeda albaab loo kala socdo afartan sano, waxaana iman maalin ay cidhiidhi la buuxdo). Waxaa wariyay Imaam Axmad binu Xambal. **[Al-Qamar: 1-8].**

كَذَّبَتْ قَبْلَهُمْ قَوْمُ نُوحٍ فَكَذَّبُوا۟ عَبْدَنَا وَقَالُوا۟ مَجْنُونٌ وَٱزْدُجِرَ ﴿٩﴾

9. Waxaa beeniyay (xaqa) iyaga hortood (Nabi) Nuux qoomkiisii, waxay beeniyeen addoonkannagii, waxayna dheheen wuu waalan yahay, waana la guulguulay, «oo la canaantay».

فَدَعَا رَبَّهُۥٓ أَنِّى مَغْلُوبٌ فَٱنتَصِرْ ﴿١٠﴾

10. Rabbigiisna tuugay inuu tabar yahay oo u gargaaro.

فَفَتَحْنَآ أَبْوَٰبَ ٱلسَّمَآءِ بِمَآءٍ مُّنْهَمِرٍ ﴿١١﴾

11. Markaasaan ku furray albaabbada samada (cirka) biyo badanna ka keennay.

وَفَجَّرْنَا ٱلْأَرْضَ عُيُونًا فَٱلْتَقَى ٱلْمَآءُ عَلَىٰٓ أَمْرٍ قَدْ قُدِرَ ﴿١٢﴾

12. Dhulkana Alle ka dillaaciyay ilo, wayna kulmeen biyihii amar la qadaray dartiis.

وَحَمَلْنَٰهُ عَلَىٰ ذَاتِ أَلْوَٰحٍ وَدُسُرٍ ﴿١٣﴾

13. Waxaanna ku xambaarray Nabi Nuux (doon) looxyo iyo musbaarro leh.

14. Kuna socota ilaalintannada si loo abaalmariyo (oo loogu gargaaro) kan lugu gaaloobay (oo nebi Nuux ah).

تَجۡرِي بِأَعۡيُنِنَا جَزَآءٗ لِّمَن كَانَ كُفِرَ ١٤

15. Waxaan uga tagnay (yuu Alle yidhi) calaamad (lagu waantoobo) ee ma jirtaa cid wacdoomi (oo wax xusuusan).

وَلَقَد تَّرَكۡنَٰهَآ ءَايَةٗ فَهَلۡ مِن مُّدَّكِرٖ ١٥

16. Seese yahay caddib Alle iyo digiddiisu.

فَكَيۡفَ كَانَ عَذَابِي وَنُذُرِ ١٦

17. Waan fududaynnay quraanka xusuus darteed ee ma jirtaa cid wacdoomi.

وَلَقَدۡ يَسَّرۡنَا ٱلۡقُرۡءَانَ لِلذِّكۡرِ فَهَلۡ مِن مُّدَّكِرٖ ١٧

Qisada (Nabi) Nuux iyo qoomkiisii wax badan buu quraanku sheegay, si loogu waana qaato, falkoodii xumaana looga leexdo, samaantana la falo, quraanka Alle fududeeyayna la raaco, laguna dhaqmo wanaaguu u yeedhi. Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: haddaan Alle u sahlin quraanka carrabka Aadamiga ruux khalqiga ka mid ah ma kareen inuu ku hadlo kalaamka Alle. **[Al-Qamar: 9-17].**

18. Caadna way beenisay (xaqii), seese noqotay caddibaaddii Alle iyo u digiddiisii.

كَذَّبَتۡ عَادٞ فَكَيۡفَ كَانَ عَذَابِي وَنُذُرِ ١٨

19. Waxaan ku dirray korkooda dabayl qabaw daran maalin baasaysan dhexdeed oo joogta ah.

إِنَّآ أَرۡسَلۡنَا عَلَيۡهِمۡ رِيحٗا صَرۡصَرٗا فِي يَوۡمِ نَحۡسٖ مُّسۡتَمِرّٖ ١٩

20. Oo dadka siibaysa sida geed timireed guntiisii la rujiyay.

تَنزِعُ ٱلنَّاسَ كَأَنَّهُمۡ أَعۡجَازُ نَخۡلٖ مُّنقَعِرٖ ٢٠

21. Seese ahaa caddibaaddii Alle iyo u digiddiisii.

فَكَيۡفَ كَانَ عَذَابِي وَنُذُرِ ٢١

22. Waxaan u fududaynay quraanka xusuus darteed ee ma jirtaa cid ku wacdoomi.

وَلَقَدۡ يَسَّرۡنَا ٱلۡقُرۡءَانَ لِلذِّكۡرِ فَهَلۡ مِن مُّدَّكِرٖ ٢٢

23. Waxaa beenisay (xaqii) loogu digay thamuud.

كَذَّبَتۡ ثَمُودُ بِٱلنُّذُرِ ٢٣

24. Waxaynna dheheen ma ruux dad ah oo naga mid ah yaan raacaynaa, markaas waxaan ku sugannahay baadi iyo dhibaato.

فَقَالُوٓاْ أَبَشَرٗا مِّنَّا وَٰحِدٗا نَّتَّبِعُهُۥٓ إِنَّآ إِذٗا لَّفِي ضَلَٰلٖ وَسُعُرٍ ٢٤

25. Ma isagoo na dhexjoogaa waxyi lagu soo dajiyay, saas ma aha ee waa beenbadane kibirlow ah.

أَءُلۡقِيَ ٱلذِّكۡرُ عَلَيۡهِ مِنۢ بَيۡنِنَا بَلۡ هُوَ كَذَّابٌ أَشِرٞ ٢٥

26. Way ogaan doonaan barri cidda beenbadane kibirlow ah.

سَيَعۡلَمُونَ غَدٗا مَّنِ ٱلۡكَذَّابُ ٱلۡأَشِرُ ٢٦

27. Hashii annagaa soo bixin jirrabkooda dartiis, ee sug kuna samir.

إِنَّا مُرۡسِلُواْ ٱلنَّاقَةِ فِتۡنَةٗ لَّهُمۡ فَٱرۡتَقِبۡهُمۡ وَٱصۡطَبِرۡ ٢٧

28. Una warran in biyuhu yihiin qayb (iyaga iyo hasha), cidbana maalin gaara leedahay.

وَنَبِّئۡهُمۡ أَنَّ ٱلۡمَآءَ قِسۡمَةُۢ بَيۡنَهُمۡۖ كُلُّ شِرۡبٖ مُّحۡتَضَرٞ ٢٨

29. Waxay u dhawaaqeeen saaxiibkood hashiina wuu dilay.

فَنَادَوۡاْ صَاحِبَهُمۡ فَتَعَاطَىٰ فَعَقَرَ ٢٩

30. Seese ahaa caddibaaddii Alle iyo u digiddiisii.

فَكَيۡفَ كَانَ عَذَابِي وَنُذُرِ ٣٠

31. Dhawaaq kaliyaan ku sii daynay, waxayna la mid noqdeen jabad burburay.

إِنَّآ أَرۡسَلۡنَا عَلَيۡهِمۡ صَيۡحَةٗ وَٰحِدَةٗ فَكَانُواْ كَهَشِيمِ ٱلۡمُحۡتَظِرِ ٣١

32. Quraankana waan u fududaynay xusuus darteed ee ma jirtaa cid ku wacdoomi.

وَلَقَدۡ يَسَّرۡنَا ٱلۡقُرۡءَانَ لِلذِّكۡرِ فَهَلۡ مِن مُّدَّكِرٖ ٣٢

Qisooyinkan iyana saasoo kale yuu quraanku meela badan ugu sheegay, murtiduse waa in wanaag la raaco, xumaanta iyo madax adayggana laga leexdo iyo ma ruux banii Aadam ah yaa na hanuunin, xaqa umbaa wax la raaca ah. **[Al-Qamar: 18-32].**

33. Way beeniyeen qoomkii (Nabi Luud) u digiddii.

كَذَّبَتۡ قَوۡمُ لُوطِۭ بِٱلنُّذُرِ ٣٣

34. Waxaanna ku dirray korkooda dabayl dhagaxyo wadata, waxaanse ka nabadgalinnay (Luud) ehelkiisii (rumeeyay) goor aroor ah.

إِنَّآ أَرۡسَلۡنَا عَلَيۡهِمۡ حَاصِبًا إِلَّآ ءَالَ لُوطٖۖ نَّجَّيۡنَٰهُم بِسَحَرٖ ٣٤

35. Nicmad xaggannaga ka timid darteed, saasaanna u abaalmarinnaa ciddii mahadisa (Alle).

نِّعۡمَةٗ مِّنۡ عِندِنَاۚ كَذَٰلِكَ نَجۡزِي مَن شَكَرَ ٣٥

36. Nabi-Luud wuxuu uga digay qoomkiisii qabashadannada (daran), wayse shakiyeen digiddaas.

وَلَقَدۡ أَنذَرَهُم بَطۡشَتَنَا فَتَمَارَوۡاْ بِٱلنُّذُرِ ٣٦

37. Waxayna dooneen martidiisii (inay xumeeyaan) markaasaan indhaha tirray, waxaana lagu yidhi dhadhamiya caddibaadda Alle iyo digiddiisa.

وَلَقَدۡ رَٰوَدُوهُ عَن ضَيۡفِهِۦ فَطَمَسۡنَآ أَعۡيُنَهُمۡ فَذُوقُواْ عَذَابِي وَنُذُرِ ٣٧

38. Waxaa ku waabariistay caddibaad sugan.

وَلَقَدۡ صَبَّحَهُم بُكۡرَةً عَذَابٞ مُّسۡتَقِرّٞ ٣٨

39. Waxaana lagu yidhi dhadhamiya caddibaadda Alle iyo digiddiisa.

فَذُوقُواْ عَذَابِي وَنُذُرِ ٣٩

40. Waan fududaynay quraanka xusuus darteed ee ma jirtaa cid wacdoomi.

وَلَقَدۡ يَسَّرۡنَا ٱلۡقُرۡءَانَ لِلذِّكۡرِ فَهَلۡ مِن مُّدَّكِرٖ ٤٠

41. Fircoon iyo ehelkiisii waxaa u yimid digid.

وَلَقَدۡ جَآءَ ءَالَ فِرۡعَوۡنَ ٱلنُّذُرُ ٤١

42. Wayna beeniyeen aayaadkannagii dhammaanteed, markaasaan u qabannay si xoog iyo awood leh.

كَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِنَا كُلِّهَا فَأَخَذۡنَٰهُمۡ أَخۡذَ عَزِيزٖ مُّقۡتَدِرٍ ٤٢

Sidoo kale qoomkii Nabi Luud iyo falkoodii xumaa, iyo fircoon iyo islawaynankiisii wax badan bay quraanka ku soo aroreen, mana qarsoona waxay ku dambeeyeen, xumaanlowna saas ha fisho. **[Al-Qamar: 33-42].**

أَكُفَّارُكُمْ خَيْرٌ مِّنْ أُوْلَٰٓئِكُمْ أَمْ لَكُم بَرَآءَةٌ فِى ٱلزُّبُرِ ﴿٤٣﴾	**43.** Ma gaaladiinnan baa ka khayr badan kuwaas mase dambi la'aanbaa idiin ku sugan kutubta.
أَمْ يَقُولُونَ نَحْنُ جَمِيعٌ مُّنتَصِرٌ ﴿٤٤﴾	**44.** Mase waxay dhihi koox guulaysan yaan nahay.
سَيُهْزَمُ ٱلْجَمْعُ وَيُوَلُّونَ ٱلدُّبُرَ ﴿٤٥﴾	**45.** Waa la jabin kooxda, dabadayna jeedin.
بَلِ ٱلسَّاعَةُ مَوْعِدُهُمْ وَٱلسَّاعَةُ أَدْهَىٰ وَأَمَرُّ ﴿٤٦﴾	**46.** Saacadda (qiyaame) yaa ballan u ah, saacadduna iyadaa daran oo khadhaadh.
إِنَّ ٱلْمُجْرِمِينَ فِى ضَلَٰلٍ وَسُعُرٍ ﴿٤٧﴾	**47.** Kuwa dambiilayaasha ah baadi iyo fogaansho yay ku sugan yihiin.
يَوْمَ يُسْحَبُونَ فِى ٱلنَّارِ عَلَىٰ وُجُوهِهِمْ ذُوقُوا۟ مَسَّ سَقَرَ ﴿٤٨﴾	**48.** (Waxaana lagu dhihi) maalinta naarta waji waji loogu ridi: dhadhamiya taabashada saqara.
إِنَّا كُلَّ شَىْءٍ خَلَقْنَٰهُ بِقَدَرٍ ﴿٤٩﴾	**49.** Wax kasta waxaan ku abuurray qadar.
وَمَآ أَمْرُنَآ إِلَّا وَٰحِدَةٌ كَلَمْحٍۭ بِٱلْبَصَرِ ﴿٥٠﴾	**50.** Amarkannaguna ma aha mid mooyeen sida ilbidhiqsi.
وَلَقَدْ أَهْلَكْنَآ أَشْيَاعَكُمْ فَهَلْ مِن مُّدَّكِرٍ ﴿٥١﴾	**51.** Dhab ahaan baan u halaagnay kuwa idin la mid ah, ee wax waantoobi ma jiraa.
وَكُلُّ شَىْءٍ فَعَلُوهُ فِى ٱلزُّبُرِ ﴿٥٢﴾	**52.** Wax kastoo dadku falo wuxuu ku sugan yahay kutubta.
وَكُلُّ صَغِيرٍ وَكَبِيرٍ مُّسْتَطَرٌ ﴿٥٣﴾	**53.** Wax kastoo yar ama waynna waa qoran yahay.
إِنَّ ٱلْمُتَّقِينَ فِى جَنَّٰتٍ وَنَهَرٍ ﴿٥٤﴾	**54.** Kuwa dhawrsadana waxay gali jannooyin iyo wabiyaal.

55. Meel la fadhiisto oo xaq ah oo Allaha Boqorka ah ee awoodda leh agtiisa ah (yaa u sugnaatay).

فِي مَقْعَدِ صِدْقٍ عِندَ مَلِيكٍ مُّقْتَدِرٍ ﴿٥٥﴾

Gaaladii reer Makaad iyo xaq diidayaashuba kama wanaagsana gaaladii hore ee la halaagay, ruux iyaga ka mid ah oo xumaan la'aan Alle u ballanqaadayna ma jiro, xoog ku faanna qiimo ma leh, immisaa jabtay cid is bidaysay tiro iyo tayaba, xusuuso maalintii badar ee muslimiinta iyo gaaladu kulmeen iyo maalmihii ka dambeeyayba, waxayna ku tusin xaqnimada quraanka iyo siduu Alle ballankiisii u oofiyay, waxaase gaalo jab adduun u sii dheer caddibaadda qiyaame iyo naarta saqara.

Alleheenna wax walbaba qadar buu ku ahaysiiyay, wax ku culusna ma jiro, wax walbana kitaab buu ku yaallaa, kuwa dhawrsadana wuxuu ku abaalmarin janno iyo sharaf, iyo meel la fadhiisto meesha u fiican, waxaa laga wariyay Cabdullaahi binu Cumar in Rasuulkii Alle yidhi (ammaan iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): (ummad la arko waxay leedahay majuusi, majuusiga ummaddaydu waa kuwa dhihi qadar ma jiro, hadday bukoodaan ha booqannina, hadday dhintaanna janaazadooda ha tagina). Waxaa wariyay Imaam Axmad binu Xambal iyo Abuudaawuud.

Hadalkii Nabiga ee saxiixa ahaana waa: (Alle kaalmayso hana cajisin, haddii wax kugu dhaco dheh waa qadar Alle wuxuu doonayna wuu falay, ha dhihin haddaan fali lahaa sidaas waxay noqon lahayd sidaas, qoomammo waxay furtaa fal shaydaan). Waxaa weriyay Muslim. **[Al-Qamar: 43-55].**

Suurat Ar-Raxmaan

سُورَةُ الرَّحۡمَٰنِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. (Allaha) Raxmaan ah.
ٱلرَّحۡمَٰنُ ﴿١﴾

2. Wuxuu baray (Nabiga iyo dadka kalaba) quraanka.
عَلَّمَ ٱلۡقُرۡءَانَ ﴿٢﴾

3. Dadkana wuu abuuray.
خَلَقَ ٱلۡإِنسَٰنَ ﴿٣﴾

4. Wuxuuna baray dadka (hadalka).
عَلَّمَهُ ٱلۡبَيَانَ ﴿٤﴾

5. Qorraxda iyo dayaxuna waxay ku socdaan xisaab.
ٱلشَّمۡسُ وَٱلۡقَمَرُ بِحُسۡبَانٖ ﴿٥﴾

6. Xiddigga iyo geedkuba way sujuudaan (Alle dartiis).
وَٱلنَّجۡمُ وَٱلشَّجَرُ يَسۡجُدَانِ ﴿٦﴾

7. Samadana Alle ayaa kor yeelay, garsoorna wuu dajiyay.
وَٱلسَّمَآءَ رَفَعَهَا وَوَضَعَ ٱلۡمِيزَانَ ﴿٧﴾

8. Si aydaan uga gudbin caddaaladda.
أَلَّا تَطۡغَوۡاْ فِي ٱلۡمِيزَانِ ﴿٨﴾

9. Miisaanka ku hagaajiya caddaalad, hana nusqaaminnina.
وَأَقِيمُواْ ٱلۡوَزۡنَ بِٱلۡقِسۡطِ وَلَا تُخۡسِرُواْ ٱلۡمِيزَانَ ﴿٩﴾

10. Dhulkana Alle wuxuu u dajiyay khalqiga.
وَٱلۡأَرۡضَ وَضَعَهَا لِلۡأَنَامِ ﴿١٠﴾

11. Dhexdiisa waxaa ah faakihad (khudaar) iyo timir fiido leh.
فِيهَا فَٰكِهَةٞ وَٱلنَّخۡلُ ذَاتُ ٱلۡأَكۡمَامِ ﴿١١﴾

12. Xubuubna (midho) bal leh iyo udgoonna wuu abuuray.
وَٱلۡحَبُّ ذُو ٱلۡعَصۡفِ وَٱلرَّيۡحَانُ ﴿١٢﴾

13. Nicmooyinka Alle teebaad beeninaysaan (insi iyo jinniyow).

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿١٣﴾

14. Dadka Alle ayaa ka abuuray dhoobo jilay oo kale ah.

خَلَقَ ٱلْإِنسَٰنَ مِن صَلْصَٰلٍ كَٱلْفَخَّارِ ﴿١٤﴾

15. Jaankana wuxuu ka abuuray ololka naarta.

وَخَلَقَ ٱلْجَآنَّ مِن مَّارِجٍ مِّن نَّارٍ ﴿١٥﴾

16. Nicmooyinka Alle teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿١٦﴾

Alle wuxuu ku billaabay magaciisa Raxmaan ah, iyo nicmooyin badan oos ugu nicmeeyay khalqigiisa, sida quraanka uu baray addoommadiisa, abuuridda, hadalka, qorraxda, dayaxa, xiddigaha, geedaha, cirka, dhulka iyo caddaaladda uu soo dajiyay, saas daraaddeed yuu ku soo celceliyay suuraddan ka digidda beeninta nicmooyinkiisa.

Jaabir waxaa laga wariyay Alle ha ka raalli noqdee inuu yidhi: waxaa u soo baxay Rasuulkii Alle (ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) asaxaabtiisii, wuxuuna ku akhriyay suuratu-raxmaan billawgeeda ilaa dhammaadkeeda, markaasay aammuseen wuxuuna yidhi: (waxaan ku akhriyay suuraddan jinniga habeenkii jinniga, iyagaana idinka fiicnaa raddinta (jawaab), markastoon imaaddo hadalka Alle sarreeye: (nicmooyinka Alle teebaad beeninaysaan) waxay dhahaan: mid nicmadaada ka mid ahna Rabbigeenow beenin mayno, adaana mahad iska leh). Waxaa wariyay Tirmidi. **[Ar-Raxmaan: 1-16].**

17. Ilaaheen waa Rabbiga labada qorrax ka soo bax iyo labada qorrax u dhac.

رَبُّ ٱلْمَشْرِقَيْنِ وَرَبُّ ٱلْمَغْرِبَيْنِ ﴿١٧﴾

18. Nicmooyinka Rabbigiin teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿١٨﴾

19. Alle waa kan labada badood dariseeyey iyagoo kulmi.

مَرَجَ ٱلْبَحْرَيْنِ يَلْتَقِيَانِ ﴿١٩﴾

20. Dhexdoodana yeelay soohdin (kala reebta) iskumana xadgudbaan.

بَيْنَهُمَا بَرْزَخٌ لَّا يَبْغِيَانِ ﴿٢٠﴾

21. Nimcooyinka Alle teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٢١﴾

يَخۡرُجُ مِنۡهُمَا ٱللُّؤۡلُؤُ وَٱلۡمَرۡجَانُ ﴿٢٢﴾

22. Waxaa lagala baxaa baddaas lu'lu' iyo murjaan (jawhar).

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٢٣﴾

23. Nimcooyinka Alle teebaad beeninaysaan.

وَلَهُ ٱلۡجَوَارِ ٱلۡمُنشَـَٔاتُ فِي ٱلۡبَحۡرِ كَٱلۡأَعۡلَـٰمِ ﴿٢٤﴾

24. Alle waxaa u sugnaaday doomaha socda badda oo buuro la mid ah.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٢٥﴾

25. Nimcooyinka Alle teebaad beeninaysaan.

كُلُّ مَنۡ عَلَيۡهَا فَانٍ ﴿٢٦﴾

26. Dhammaan waxa (dhulka) korkiisa ah wuu tagi.

وَيَبۡقَىٰ وَجۡهُ رَبِّكَ ذُو ٱلۡجَلَـٰلِ وَٱلۡإِكۡرَامِ ﴿٢٧﴾

27. Waxaase hadhi wejiga Rabbigaada wayn ee sharafta leh, (Rabbi ma dhinto).

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٢٨﴾

28. Nimcooyinka Alle teebaad beeninaysaan.

Qorraxdu halkay ka soo muuqato, ama ku qarsoonto, badaha aan isku khaldamaynin jowharta lagala soo baxo, doomuhuna dhex sabbeeyaan iyo khalqiga intiisa kalaba Alle ayaa iska leh, isagaana maamula, wax kasta oo dhulka ku dul noolna wuu tagi oo dhiman, wax Alle ka soo hadhay oo joogi ama baaqi ahaanna ma jiro, saa darteed, waa in la hormarsadaa camal wax tara maalinta aan naf kale wax taraynin in Alle doono mooyeen. **[Ar-Raxmaan: 17-28].**

يَسۡـَٔلُهُۥ مَن فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۚ كُلَّ يَوۡمٍ هُوَ فِي شَأۡنٍ ﴿٢٩﴾

29. Waxaa Alle wax waydiista samada iyo dhulka waxa ku sugan, goor walbana wuxuu maamuli arrin.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٣٠﴾

30. Nimcooyinka Alle teebaad beeninaysaan.

سَنَفۡرُغُ لَكُمۡ أَيُّهَ ٱلثَّقَلَانِ ﴿٣١﴾

31. Waana idin xisaabin si dhab ah insi iyo jinniyow.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٣٢﴾

32. Nimcooyinka Alle na teebaad beeninaysaan.

يَٰمَعۡشَرَ ٱلۡجِنِّ وَٱلۡإِنسِ إِنِ ٱسۡتَطَعۡتُمۡ أَن تَنفُذُواْ مِنۡ أَقۡطَارِ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ فَٱنفُذُواْۚ لَا تَنفُذُونَ إِلَّا بِسُلۡطَٰنٖ ﴿٣٣﴾

33. Jinni iyo insiyow haddaad kartaan inaad ka baxdaan samada jahooyinkooda iyo dhulka ka baxa, kamana bixi kartaan xujo la'aan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٣٤﴾

34. Nimcooyinka Alle teebaad beeninaysaan.

يُرۡسَلُ عَلَيۡكُمَا شُوَاظٞ مِّن نَّارٖ وَنُحَاسٞ فَلَا تَنتَصِرَانِ ﴿٣٥﴾

35. Alle (hadduu doono) wuxuu idinku diri olol naar ah, iyo maar (la dhalaaliyay) umana gargaarsanaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٣٦﴾

36. Nimcooyinka Alle teebaad beeninaysaan.

فَإِذَا ٱنشَقَّتِ ٱلسَّمَآءُ فَكَانَتۡ وَرۡدَةٗ كَٱلدِّهَانِ ﴿٣٧﴾

37. Markay samadu dillaacdo oy noqoto ubax guduudan oo subag la mid ah (dhalaasho) markaas dadkaa la abaalmarin.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٣٨﴾

38. Nimcooyika Alle teebaad beeninaysaan.

فَيَوۡمَئِذٖ لَّا يُسۡـَٔلُ عَن ذَنۢبِهِۦٓ إِنسٞ وَلَا جَآنّٞ ﴿٣٩﴾

39. Maalintaas ruux la warsan dambigiisa insi iyo jinniba ma jiro.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٤٠﴾

40. Nicmooyinka Alle teebaad beeninaysaan.

Cid walba way u baahan tahay ilaaheed, cir iyo dhul iyo meel kastaba ha joogtee, Alle na isagaa goor walba maamula khalqigiisa, isagaana xisaabin qiyaamada, wax awood ah ama xoog ah oo Ilaahay lagaga hortagaana ma jiro, iyo wax ka carari kara midna, xumaanlowgana wuxuu ku abaalmarin xumaan, wax gargaara ahna ma helo maalinta xisaabta iyo qiyaamaha, Alle na wax kama qarsoona cidna wax ma warsado maalinta abaalmarinta. **[Ar-Raxmaan: 29-40].**

يُعۡرَفُ ٱلۡمُجۡرِمُونَ بِسِيمَٰهُمۡ فَيُؤۡخَذُ بِٱلنَّوَٰصِي وَٱلۡأَقۡدَامِ ﴿٤١﴾

41. Dambiilayaasha waxaa lagu aqoonsan astaamahooda, waxaana la qaban foodda iyo

gommadaha (naartaana lagu tuuri).

42. Nimcooyinka Alle teebaad beeninaysaan. فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٤٢﴾

43. Tani waa jahannamadii ay beeniyeen dambiilayaashu (yaa lagu dhihi). هَٰذِهِۦ جَهَنَّمُ ٱلَّتِى يُكَذِّبُ بِهَا ٱلْمُجْرِمُونَ ﴿٤٣﴾

44. Waxay ku meereysan jahannamo iyo biyo kulayl daran dhexdooda. يَطُوفُونَ بَيْنَهَا وَبَيْنَ حَمِيمٍ ءَانٍ ﴿٤٤﴾

45. Nimcooyinka Alle teebaad beeninaysaan. فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٤٥﴾

46. Ruuxii ka yaaba Alle hor istaaggiisa wuxuu mudan laba janno. وَلِمَنْ خَافَ مَقَامَ رَبِّهِۦ جَنَّتَانِ ﴿٤٦﴾

47. Nimcooyinka Alle teebaad beeninaysaan. فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٤٧﴾

48. Jannooyinkaas oo leh laamo (waaweyn oo caleemo iyo miro badan). ذَوَاتَآ أَفْنَانٍ ﴿٤٨﴾

49. Nicmooyinka Alle teebaad beeninaysaan. فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٤٩﴾

50. Waxaa laga helaa ilo socda. فِيهِمَا عَيْنَانِ تَجْرِيَانِ ﴿٥٠﴾

51. Nimcooyinka Alle teebaad beeninaysaan. فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥١﴾

52. Waxaa laga helaa nooc kasta oo faakiha ah (khudaar ah). فِيهِمَا مِن كُلِّ فَٰكِهَةٍ زَوْجَانِ ﴿٥٢﴾

53. Nimcooyinka Alle teebaad beeninaysaan. فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥٣﴾

Sama falaha iyo xumaan faluhu iskuma qasna Alle agtiisa, waxaana dambiilaha lagu aqoonsan calaamooyinkiisa, ciqaab iyo naarta jahannama oo lagu tuurana wuu la kulmi, taasoo uu dhexmeereysan, lamana dulmiyin ee isagaa xaqa beeniyay, ruuxiise ka yaaba Alle la kulankiisa iyo xisaabtiisa waxaa lagu abaalmarin janno wanaag ku dhan yahay, nicmooyinka Alleheen waa in lagu mahad naqo khayrkana loogu kaalmaysto. **[Ar-Raxmaan: 41-53].**

مُتَّكِـِٔينَ عَلَىٰ فُرُشِۭ بَطَآئِنُهَا مِنْ إِسْتَبْرَقٍۚ وَجَنَى ٱلْجَنَّتَيْنِ دَانٍ ﴿٥٤﴾

54. Waxay ku dangiigsan (ehlu jannuhu) gogol ay tahay hoosteedu istabraq (xariir), midhaha jannooyinku waa u dhaw yihiin.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥٥﴾

55. Nicmooyinka Alle teebaad beeninaysaan.

فِيهِنَّ قَـٰصِرَٰتُ ٱلطَّرْفِ لَمْ يَطْمِثْهُنَّ إِنسٌ قَبْلَهُمْ وَلَا جَآنٌّ ﴿٥٦﴾

56. Jannooyinka iyo firaashka waxaa ku sugan haween (indha waawayn oo dhawrsoon) oo indhahoodu laaban yihiin (oo aanay ka gudbeyn raggooda), oosan taabannin horay insi iyo jinni midna.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥٧﴾

57. Nicmooyinka Alle teebaad beeninaysaan.

كَأَنَّهُنَّ ٱلْيَاقُوتُ وَٱلْمَرْجَانُ ﴿٥٨﴾

58. Waxaad mooddaa haweenkaas yaaquut iyo murjaan (jawhar midab leh).

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥٩﴾

59. Nicmooyinka Alle teebaad beeninaysaan.

هَلْ جَزَآءُ ٱلْإِحْسَـٰنِ إِلَّا ٱلْإِحْسَـٰنُ ﴿٦٠﴾

60. Wanaag abaalkiisu soo wanaag ma aha.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٦١﴾

61. Nicmooyinka Alle teebaad beeninaysaan.

Adduunku waa guri shaqo, aakhirana waa guriga abaalmarinta, suuraddanna wax badan yuu Ilaaheen kaga warramay jannada iyo tilmaameheeda, iyo wanaaggeeda, iyo in ehlu jannuhu ku noolaan khayr iyo nicmo, iyo wax kasta oo wanaag ah. Alle ayaana ku abaal mariyay nicmadaas, maxaa yeelay wanaag abaalkiisu waa wanaag. **[Ar-Raxmaan: 54-61].**

وَمِن دُونِهِمَا جَنَّتَانِ ﴿٦٢﴾

62. Waxay heli labadaas janno ka sokow laba beerood oo kale.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٦٣﴾

63. Nicmooyinka Alle teebaad beeninaysaan.

64. Waana laba jannoo madow (cagaaran).
مُدْهَآمَّتَانِ ﴿٦٤﴾

65. Nicmooyinka Alle teebaad beeninaysaan.
فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٦٥﴾

66. Waxaa dhexdeeda ah laba ilood oo burqan.
فِيهِمَا عَيْنَانِ نَضَّاخَتَانِ ﴿٦٦﴾

67. Nicmooyinka Alle teebaad beeninaysaan.
فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٦٧﴾

68. Dhexdooda waxaa ah faakihad (khudrad) iyo timir iyo rummaan.
فِيهِمَا فَٰكِهَةٌ وَنَخْلٌ وَرُمَّانٌ ﴿٦٨﴾

69. Nicmooyinka Alle teebaad beeninaysaan.
فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٦٩﴾

70. Dhexdooda waxaa ah haween khayr leh oo quruxsan.
فِيهِنَّ خَيْرَٰتٌ حِسَانٌ ﴿٧٠﴾

71. Nicmooyinka Alle teebaad beeninaysaan.
فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٧١﴾

72. Waa haween indhacad oo gurigooda jooga.
حُورٌ مَّقْصُورَٰتٌ فِى ٱلْخِيَامِ ﴿٧٢﴾

73. Nicmooyinka Alle teebaad beeninaysaan.
فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٧٣﴾

74. Waa haween uusan horay u taabanin insi iyo jinni midna.
لَمْ يَطْمِثْهُنَّ إِنسٌ قَبْلَهُمْ وَلَا جَآنٌّ ﴿٧٤﴾

75. Nicmooyinka Alle teebaad beeninaysaan.
فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٧٥﴾

76. Waxayna ehlu-jannuhu ku dangiigsan barkimo cagaaran iyo gogol quruxsan.
مُتَّكِـِٔينَ عَلَىٰ رَفْرَفٍ خُضْرٍ وَعَبْقَرِىٍّ حِسَانٍ ﴿٧٦﴾

77. Nicmooyinka Alle teebaad beeninaysaan.
فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٧٧﴾

78. Waxaa barakadiisu badnaatay magaca Rabbigaada wayn ee sharafta leh.

تَبَـٰرَكَ ٱسْمُ رَبِّكَ ذِى ٱلْجَلَـٰلِ وَٱلْإِكْرَامِ ﴿٧٨﴾

Saasoo kale waxay aayadahani ka qisoon jannada iyo ehelkeeda iyo waxa wanaag ah ee Alle ku dhammeeyay, waxayna suuraddu ku soo uruursatay markay wax badan soo celcelisay nicmada Ilaahay iyo inaan la beeninnin waynida Ilaaheen iyo sharaftiisa, waxaana waajib ah in si dhab ah loo qaddariyo loona caabudo, maxaa yeelay waa Ilaaha adduunkiyo aakhiraba, ee mu'miniinta u naxariista, dambiilayaashana ka aarsada.

Waxaa la waydiiyay Xasanul Basri hadalka Alle sarreeye (gogol quruxsan) wuxuuna yidhi: waa gogosha ehlu-jannaha ee aabihiin la waayee doona. **[Ar-Raxmaan: 62-78].**

Suurat Al-Waaqicah

سُورَةُ الْوَاقِعَةِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

إِذَا وَقَعَتِ ٱلْوَاقِعَةُ ﴿١﴾
لَيْسَ لِوَقْعَتِهَا كَاذِبَةٌ ﴿٢﴾

خَافِضَةٌ رَّافِعَةٌ ﴿٣﴾

إِذَا رُجَّتِ ٱلْأَرْضُ رَجًّا ﴿٤﴾
وَبُسَّتِ ٱلْجِبَالُ بَسًّا ﴿٥﴾
فَكَانَتْ هَبَآءً مُّنۢبَثًّا ﴿٦﴾
وَكُنتُمْ أَزْوَٰجًا ثَلَٰثَةً ﴿٧﴾

فَأَصْحَٰبُ ٱلْمَيْمَنَةِ مَآ أَصْحَٰبُ ٱلْمَيْمَنَةِ ﴿٨﴾
وَأَصْحَٰبُ ٱلْمَشْـَٔمَةِ مَآ أَصْحَٰبُ ٱلْمَشْـَٔمَةِ ﴿٩﴾
وَٱلسَّٰبِقُونَ ٱلسَّٰبِقُونَ ﴿١٠﴾
أُو۟لَٰٓئِكَ ٱلْمُقَرَّبُونَ ﴿١١﴾
فِى جَنَّٰتِ ٱلنَّعِيمِ ﴿١٢﴾
ثُلَّةٌ مِّنَ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿١٣﴾

1. Markay qiyaamadu dhacdo.
2. Dhicidddaas wax beenin ma jiro (markay arkaan).
3. Waana (mid) hoos u dhiga kor u dhiga ah.
4. Marka la gilgilo dhulka gilgilid.
5. Buurahana la ridqo.
6. Oy noqoto boodh firdhisan.
7. Ood ahaataan saddex nooc, (markaasaa dadka la soo bixin).
8. Kuwa midigta mari (waa ehlu-jannehee), ma taqaan kuwa midigta mari.
9. Iyo kuwa bidixda mari (waa ehlu naarkee) ma taqaan kuwa bidixda mari.
10. Iyo kuwii aad u hormaray.
11. Waa kuwa Alle dhaweeyay.
12. Waxayna gali jannooyin nicma leh.
13. Waana koox ka mid ah kuwii hore.

14. Iyo wax yar oo ka mid ah kuwii dambeeyay.
وَقَلِيلٌ مِّنَ ٱلْـَٔاخِرِينَ ﴿١٤﴾

15. Sariiro dahab laga sameeyay yayna ku sugnaan.
عَلَىٰ سُرُرٍ مَّوْضُونَةٍ ﴿١٥﴾

16. Oy kuna dangiigsan korkeeda iyagoo is qaabili.
مُّتَّكِـِٔينَ عَلَيْهَا مُتَقَـٰبِلِينَ ﴿١٦﴾

Maalinta qiyaame waa magacyo badan tahay, waynideeda iyo dhibkeeda darteed, dhabahaan bayna u iman markaasay cid walba rumayn, maxayse tari rumayni waqtigaas, waxaana dhaca maalintaas dad kor loo qaado oo la sharrifo iyo mid hoos loo dhigo oo la dulleeyo, dadkuna wuxuu noqon saddex qaybood, kuwa aad u hormaray iyo kuwo kitaabkooda midigta ka qaadan, iyo kuwo xun oo jidka jahannama qaadi, saas darteed yey waajib tahay inuu u darbado ruux walba maalintaas. Kana fiirsado kooxduu noqon isagoo Alle ku xidhan.

Cusmaan binu Suraaqa wuxuu sheegay: in saacadda qiyaame hoos ugu dhigi naarta cadowga Alle, jannaduna kor ugu qaadi awliyadiisa. **[Al-Waaqicah: 1-16].**

17. Waxaa la dhex wareegi wiilal waari.
يَطُوفُ عَلَيْهِمْ وِلْدَٰنٌ مُّخَلَّدُونَ ﴿١٧﴾

18. Koobab iyo kildhiyo iyo galaasyo khamro soconaysa laga buuxiyay.
بِأَكْوَابٍ وَأَبَارِيقَ وَكَأْسٍ مِّن مَّعِينٍ ﴿١٨﴾

19. Madax xanuun iyo caqlitagid midna ma leh.
لَّا يُصَدَّعُونَ عَنْهَا وَلَا يُنزِفُونَ ﴿١٩﴾

20. Faakihaday «khudaartay» doonaanna way heli.
وَفَـٰكِهَةٍ مِّمَّا يَتَخَيَّرُونَ ﴿٢٠﴾

21. Iyo hilib shimbir oo kay rabaan ah.
وَلَحْمِ طَيْرٍ مِّمَّا يَشْتَهُونَ ﴿٢١﴾

22. Iyo haween janno oo leh indha cadcad iyo wayninba isku darsaday.
وَحُورٌ عِينٌ ﴿٢٢﴾

23. Ood mooddo jawhar la ilaaliyay.
كَأَمْثَـٰلِ ٱللُّؤْلُوِ ٱلْمَكْنُونِ ﴿٢٣﴾

24. Waana abaalmarin waxay camalfali jireen (oo wanaag ahaa).
جَزَآءًۢ بِمَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿٢٤﴾

25. Kumana maqlaan jannada hadal micno darra iyo dambi midna.

لَا يَسْمَعُونَ فِيهَا لَغْوًا وَلَا تَأْثِيمًا ﴿٢٥﴾

26. Waxayse ku maqli salaan (dhexdooda ah).

إِلَّا قِيلًا سَلَٰمًا سَلَٰمًا ﴿٢٦﴾

Waxaas wanaag iyo janno ah waxaa Alle u darbay koox ka mid ah ehlu-jannaha oo ah kuwo ku hormaray wanaagga iyo khayrka, waxayna muujin arrintaasu inayan darajada jannadu isku mid ahayn, inkastoy mid waliba ku filan tahay ehelkeeda. Nicmada aakhiro iyo cabbitaankeedu midna xanuun iyo madax xanuun ma leh.

Ibnu Cabbaas waxaa laga wariyay inuu yidhi: khamrada (adduunka) afar arrimood bay leedahay «waalli, madax xanuun, mantag iyo kaadi». **[Al-Waaqicah: 17-26].**

27. Kuwa midigta mari, ma taqaan kuwa midigta.

وَأَصْحَٰبُ ٱلْيَمِينِ مَآ أَصْحَٰبُ ٱلْيَمِينِ ﴿٢٧﴾

28. Waxay heli geedka sidriga ah oon qodax lahayn.

فِى سِدْرٍ مَّخْضُودٍ ﴿٢٨﴾

29. Iyo geedka dhalxiga ah oo buuxa.

وَطَلْحٍ مَّنضُودٍ ﴿٢٩﴾

30. Iyo hoos joogta ah.

وَظِلٍّ مَّمْدُودٍ ﴿٣٠﴾

31. Iyo biyo socda (goor walba).

وَمَآءٍ مَّسْكُوبٍ ﴿٣١﴾

32. Iyo faakiha badan.

وَفَٰكِهَةٍ كَثِيرَةٍ ﴿٣٢﴾

33. Oon la goynaynin lana reebaynin.

لَّا مَقْطُوعَةٍ وَلَا مَمْنُوعَةٍ ﴿٣٣﴾

34. Iyo gogol la koryeelay.

وَفُرُشٍ مَّرْفُوعَةٍ ﴿٣٤﴾

35. Annagaa ahaysiinnay ahaysiin (da'yarayn haweenka jannada).

إِنَّآ أَنشَأْنَٰهُنَّ إِنشَآءً ﴿٣٥﴾

36. Kana dhigi kuwa aan la taaban.

فَجَعَلْنَٰهُنَّ أَبْكَارًا ﴿٣٦﴾

37. Oo is jeclaysiin (raggooda), simanna da' ahaan.

عُرُبًا أَتْرَابًا ﴿٣٧﴾

38. Kuwa midigta yaa muta (arrintaas).
لِّأَصۡحَٰبِ ٱلۡيَمِينِ ﴿٣٨﴾

39. Waana koox kuwii hore ka mid ah.
ثُلَّةٞ مِّنَ ٱلۡأَوَّلِينَ ﴿٣٩﴾

40. Iyo koox kuwa dambe ka mid ah.
وَثُلَّةٞ مِّنَ ٱلۡأٓخِرِينَ ﴿٤٠﴾

Kuwa midigta mari oo jannada aadi, ama kitaabkooda midigta laga siin waa kooxda labaad ee suuraddani ka warrami, waxaana ka horreeyay saabiqiintii, siduuna Alle khayr badan iyo janno ugu abaalmarin kuwii hormaray yuu ugu yaboohay wanaag kuwii midigtana, maxaa yeelay khayrka iyo naxariista Alle waa badan tahay wuxuuna ku shubaa cidduu doono, camal wanaagsan iyo shaqase waa lagama maarmaan ruuxii caqli leh. **[Al-Waaqicah: 27-40].**

41. Kuwa bidixda mari, ma taqaan kuwa bidixda.
وَأَصۡحَٰبُ ٱلشِّمَالِ مَآ أَصۡحَٰبُ ٱلشِّمَالِ ﴿٤١﴾

42. Waxay ku sugnaan naar daran iyo biyo kulayl badan.
فِي سَمُومٖ وَحَمِيمٖ ﴿٤٢﴾

43. Iyo hoos madow oo wax guba.
وَظِلّٖ مِّن يَحۡمُومٖ ﴿٤٣﴾

44. Aan qaboobayn aragna fiicnayn.
لَّا بَارِدٖ وَلَا كَرِيمٍ ﴿٤٤﴾

45. Waxay ahaayeen arrintaas ka hor kuwo ku raaxaysta (xumaanta).
إِنَّهُمۡ كَانُواْ قَبۡلَ ذَٰلِكَ مُتۡرَفِينَ ﴿٤٥﴾

46. Waxayna daa'imi jireen dambi wayn.
وَكَانُواْ يُصِرُّونَ عَلَى ٱلۡحِنثِ ٱلۡعَظِيمِ ﴿٤٦﴾

47. Waxayna dhihi jireen ma markaan dhimanno oon lafo iyo carro noqonnaa lana soo bixin.
وَكَانُواْ يَقُولُونَ أَئِذَا مِتۡنَا وَكُنَّا تُرَابٗا وَعِظَٰمًا أَءِنَّا لَمَبۡعُوثُونَ ﴿٤٧﴾

48. Iyo aabayaalkannagii horreeyay (sidaa oo kale).
أَوَءَابَآؤُنَا ٱلۡأَوَّلُونَ ﴿٤٨﴾

49. Waxaad dhahdaa kuwii horreeyay iyo kuwii dambeeyayba.
قُلۡ إِنَّ ٱلۡأَوَّلِينَ وَٱلۡأٓخِرِينَ ﴿٤٩﴾

50. Waxaa loo soo kulmin maalin la yaqaan (qiyaamo).
لَمَجۡمُوعُونَ إِلَىٰ مِيقَٰتِ يَوۡمٖ مَّعۡلُومٖ ﴿٥٠﴾

ثُمَّ إِنَّكُمْ أَيُّهَا ٱلضَّآلُّونَ ٱلْمُكَذِّبُونَ ﴿٥١﴾

51. Markaas baadiyaal yahow beeniyayaasha ah.

لَآكِلُونَ مِن شَجَرٍ مِّن زَقُّومٍ ﴿٥٢﴾

52. Waxaad wax ka cunaysaan geed xun.

فَمَالِـُٔونَ مِنْهَا ٱلْبُطُونَ ﴿٥٣﴾

53. Aad kana buuxinaysaan caloosha.

فَشَٰرِبُونَ عَلَيْهِ مِنَ ٱلْحَمِيمِ ﴿٥٤﴾

54. Waxaadna ku cabbaysaan biyo kulayl badan.

فَشَٰرِبُونَ شُرْبَ ٱلْهِيمِ ﴿٥٥﴾

55. Waxaadna u cabbaysaan sida geel aad u oomman.

هَٰذَا نُزُلُهُمْ يَوْمَ ٱلدِّينِ ﴿٥٦﴾

56. Kaasina waa waxa lagu soori (gaalada) maalinta abaalmarinta (qiyaamada).

Kuwanna waa qaybtii saddexaad ee suuraddu sheegtay, labadii horana waxay ahaayeen ehlu janno, kuwan bidixda marayna waxay noqdeen ehlu-naar. Alle na cidna ma dulmiyo, hase yeeshee wuxuu ka abaalmariyaa camalkiisa uun maxaa yeelay xumaan badane, xadgudba, soo bixinta beeniyay oo jidka xun raacay la mid ma aha sama fale, Alle addeece iyo jid wanaagsan qaade.

Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: dambiga wayni waa gaalnimo, Mujaahid iyo Cikrimana saasaa laga sheegay. **[Al-Waaqicah: 41-56].**

نَحْنُ خَلَقْنَٰكُمْ فَلَوْلَا تُصَدِّقُونَ ﴿٥٧﴾

57. (Alle wuxuu yidhi) annagaa idin abuurraye maxaad la rumayn waydeen (soo bixinta).

أَفَرَءَيْتُم مَّا تُمْنُونَ ﴿٥٨﴾

58. Ka warrama dhibicda aad tuuraysaan «manida».

ءَأَنتُمْ تَخْلُقُونَهُۥٓ أَمْ نَحْنُ ٱلْخَٰلِقُونَ ﴿٥٩﴾

59. Ma idinkaa abuura mase annagaa abuurra.

نَحْنُ قَدَّرْنَا بَيْنَكُمُ ٱلْمَوْتَ وَمَا نَحْنُ بِمَسْبُوقِينَ ﴿٦٠﴾

60. Annagaa idinku eheynay geerida, ruux naga fakanna ma jiro.

عَلَىٰٓ أَن نُّبَدِّلَ أَمْثَٰلَكُمْ وَنُنشِئَكُمْ فِى مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿٦١﴾

61. Inaan idinku baddallo kuwo idin la mid ah oon idinka ahaysiinno waxaydaan aqoon.

62. Dhab ahaan baad u ogtihiin abuuriddii hore, ee maad wax xusuusataan.

وَلَقَدْ عَلِمْتُمُ ٱلنَّشْأَةَ ٱلْأُولَىٰ فَلَوْلَا تَذَكَّرُونَ ﴿٦٢﴾

63. Ka warrama waxaad beereysaan.

أَفَرَءَيْتُم مَّا تَحْرُثُونَ ﴿٦٣﴾

64. Ma idinkaa soo dhaliya mase annagaa soo dhalinna.

ءَأَنتُمْ تَزْرَعُونَهُۥٓ أَمْ نَحْنُ ٱلزَّٰرِعُونَ ﴿٦٤﴾

65. Haddaan doonno waxaan ka dhigaynaa burbur (aan wax tarin) markaasaad yaabaysaan (murugoonaysaan).

لَوْ نَشَآءُ لَجَعَلْنَٰهُ حُطَٰمًا فَظَلْتُمْ تَفَكَّهُونَ ﴿٦٥﴾

66. (Idinkoo dhihi) waa nala khasaariyay.

إِنَّا لَمُغْرَمُونَ ﴿٦٦﴾

67. Mase waa nala hoojiyay.

بَلْ نَحْنُ مَحْرُومُونَ ﴿٦٧﴾

68. Ka warrama biyahaad cabbaysaan.

أَفَرَءَيْتُمُ ٱلْمَآءَ ٱلَّذِى تَشْرَبُونَ ﴿٦٨﴾

69. Ma idinkaa ka soo dajiyay daruurta mase annakaa soo dajinnay.

ءَأَنتُمْ أَنزَلْتُمُوهُ مِنَ ٱلْمُزْنِ أَمْ نَحْنُ ٱلْمُنزِلُونَ ﴿٦٩﴾

70. Haddaan doonno waxaan ka yeelaynaa khadhaadh (aan la hollin karin) ee maad ku mahadisaan (Alle).

لَوْ نَشَآءُ جَعَلْنَٰهُ أُجَاجًا فَلَوْلَا تَشْكُرُونَ ﴿٧٠﴾

71. Ka warrama dabkaad madagta ka shiddaan.

أَفَرَءَيْتُمُ ٱلنَّارَ ٱلَّتِى تُورُونَ ﴿٧١﴾

72. Ma idinkaa ahaysiiyay geedkeeda mase annagaa ahaysiinnay.

ءَأَنتُمْ أَنشَأْتُمْ شَجَرَتَهَآ أَمْ نَحْنُ ٱلْمُنشِـُٔونَ ﴿٧٢﴾

73. Annagaa ka dhignay dabka waano iyo nacfiga kuwa safarka ah (iyo cidlada).

نَحْنُ جَعَلْنَٰهَا تَذْكِرَةً وَمَتَٰعًا لِّلْمُقْوِينَ ﴿٧٣﴾

74. Ee waynee oo u tasbiixso magaca Rabbigaada wayn.

فَسَبِّحْ بِٱسْمِ رَبِّكَ ٱلْعَظِيمِ ﴿٧٤﴾

Aayadahan waxay ka warrami awoodda Alle iyo nicmooyinkiisa uu dadka ugu nicmeeyay, sida abuuridda cunnada uu dhulka ka soo bixiyo, biyaha macaan oos cirka inooga keeno iyo geedaha uu dabka ku abuuray si looga shito iyo khayrkiisa kale ee badanba, hadal iyo dhammaanna Alle mahad, ammaan iyo addeecid buu mutaa si loogu liibaano naxariistiisa waasaca ah.

Waxaa la wariyay in muslimiintu saddex wadaagaan: dabka, daaqa iyo biyaha». Waxaa wariyay Axmad iyo Abuu-Daawuud Iyo Ibnu Maajah. **[Al-Waaqicah: 57-74].**

۞ فَلَآ أُقۡسِمُ بِمَوَٰقِعِ ٱلنُّجُومِ ﴿٧٥﴾	**75.** (Alle wuxuu yidhi) waxaan ku dhaartay halkay xiddiguhu ku dhacaan (ku qarsoomaan).
وَإِنَّهُۥ لَقَسَمٞ لَّوۡ تَعۡلَمُونَ عَظِيمٌ ﴿٧٦﴾	**76.** Waana dhaar wayn haddaad ogtihiine.
إِنَّهُۥ لَقُرۡءَانٞ كَرِيمٞ ﴿٧٧﴾	**77.** Quraanku waa shay sharaf leh.
فِي كِتَٰبٖ مَّكۡنُونٖ ﴿٧٨﴾	**78.** Wuxuuna ku sugan yahay kitaab la dhawray.
لَّا يَمَسُّهُۥٓ إِلَّا ٱلۡمُطَهَّرُونَ ﴿٧٩﴾	**79.** Mana taabto ruuxaan daahir ahayn.
تَنزِيلٞ مِّن رَّبِّ ٱلۡعَٰلَمِينَ ﴿٨٠﴾	**80.** Waxaana soo dajiyay Rabbiga caalamka.
أَفَبِهَٰذَا ٱلۡحَدِيثِ أَنتُم مُّدۡهِنُونَ ﴿٨١﴾	**81.** Ee ma quraankan yaad beeninaysaan.
وَتَجۡعَلُونَ رِزۡقَكُمۡ أَنَّكُمۡ تُكَذِّبُونَ ﴿٨٢﴾	**82.** Ood ka yeeleysaan (mahaddii) risqigiinna beenin (xaqa).
فَلَوۡلَآ إِذَا بَلَغَتِ ٱلۡحُلۡقُومَ ﴿٨٣﴾	**83.** Maxaydaan markay naftu dhuunta gaadho.
وَأَنتُمۡ حِينَئِذٖ تَنظُرُونَ ﴿٨٤﴾	**84.** Idinkuna aad fiirinaysaan (ruuxa dhiman).
وَنَحۡنُ أَقۡرَبُ إِلَيۡهِ مِنكُمۡ وَلَٰكِن لَّا تُبۡصِرُونَ ﴿٨٥﴾	**85.** Annaguna aan idiinka dhawnahay, laakiinse aydaan arkaynin.
فَلَوۡلَآ إِن كُنتُمۡ غَيۡرَ مَدِينِينَ ﴿٨٦﴾	**86.** Haddaad tihiin kuwa aan la soo bixinaynin.

87. Maad nafta ku celisaan, haddaad run sheegaysaan.

تَرْجِعُونَهَآ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٨٧﴾

88. Hadduu ka mid yahay (ruuxa dhiman) kuwa Alle dhaweeyay.

فَأَمَّآ إِن كَانَ مِنَ ٱلْمُقَرَّبِينَ ﴿٨٨﴾

89. Wuxuu heli naxariis iyo farax iyo jannada naciima.

فَرَوْحٌ وَرَيْحَانٌ وَجَنَّتُ نَعِيمٍ ﴿٨٩﴾

90. Hadduu yahay kuwa midigta marina.

وَأَمَّآ إِن كَانَ مِنْ أَصْحَٰبِ ٱلْيَمِينِ ﴿٩٠﴾

91. Nabadgalyaa u sugnaatay (iyo wanaag).

فَسَلَٰمٌ لَّكَ مِنْ أَصْحَٰبِ ٱلْيَمِينِ ﴿٩١﴾

92. Hadduu yahay kuwa xaqa beeniyay ee dhumayna.

وَأَمَّآ إِن كَانَ مِنَ ٱلْمُكَذِّبِينَ ٱلضَّآلِّينَ ﴿٩٢﴾

93. Wuxuu heli martiqaad kulayl badan.

فَنُزُلٌ مِّنْ حَمِيمٍ ﴿٩٣﴾

94. Iyo galidda naarta jaxiimo.

وَتَصْلِيَةُ جَحِيمٍ ﴿٩٤﴾

95. Waxaas (la soo sheegay) waa run dhab ah.

إِنَّ هَٰذَا لَهُوَ حَقُّ ٱلْيَقِينِ ﴿٩٥﴾

96. Ee u tasbiixso magaca Rabbigaada wayn.

فَسَبِّحْ بِٱسْمِ رَبِّكَ ٱلْعَظِيمِ ﴿٩٦﴾

Alle wuxuu ku dhaartay xiddigaha iyo halkay ku qarsoomaan, waana dhaar wayne in quraanku sharaf leeyahay, dhawrsoonna yahay, ruuxaan nadiif ahaynna u habboonayn inuu taabto, xagga Alle na ka soo dagay, wax la beeniyo iyo wax la dafirana uusan ahayn, Allahaas wayn ee awoodda leh isagaa wax dila wuxuu doonana wax baajin kara ma jiro, dadkuna siday suuraddu horayba u sheegtay waa saddex qaybood, laba ehlu janna ah oo liibaanay iyo mid khasaaray.

Cuqba binu Caamir wuxuu yidhi: markay ku soo dagtay Rasuulka Alle naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee (u tasbiixso magaca Rabbigaada wayn) wuxuu yidhi: «yeela rukuucdiinna» markay soo dagtay: (u tasbiixso magaca Rabbigaaga sare) wuxuu yidhi Rasuulkii Alle: «yeela sujuudiinna» waxaa wariyay Axmad, Abuudaawud iyo Ibnu-Maajah. Bukhaarina wuxuu ka wariyay Abii-Hurayre inuu yidhi, Rasuulkii Alle wuxuu yidhi: «laba kalimo oo carrabka ku fudud miisaankana ku culus Allaha Raxmaan ahna jecel yahay waa: Alle ayaa ceeb ka dheer, mahadna leh, waxaa ceeb ka dheer Allaha wayn». **[Al-Waaqicah: 75-96].**

Suurat Al-Xadiid

سُورَةُ الحَدِيدِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaa Alle sharrifa (oo wayneeya) waxa ku sugan samaawaadka iyo dhulka, Alle na waa adkaade falsan.

سَبَّحَ لِلَّهِ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۖ وَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿١﴾

2. Waxaa Alle u sugnaaday xukunka samaawaadka iyo dhulka isagaa wax nooleeya waxna dila, waxwalbana wuu karaa.

لَهُۥ مُلْكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۖ يُحْىِۦ وَيُمِيتُ ۖ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿٢﴾

3. Allaah waa kan horreeyey, (wax ka horreeyana ayan jirin) waa kan dambayn (oo wax ka dambayni jirin) waa kan ka sarreeya wax kasta (oo wax ka sarreeyaa jirin) waa kan baadina (oo wax ka dhawi jirin), wax walbana og.

هُوَ ٱلْأَوَّلُ وَٱلْءَاخِرُ وَٱلظَّٰهِرُ وَٱلْبَاطِنُ ۖ وَهُوَ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمٌ ﴿٣﴾

4. Alle waa kan ku abuuray samaawaadka iyo dhulka lix maalmood qaddarkood, markaasna carshiga ka sara maray, wuxuuna ogyahay waxa dhulka gali iyo waxa ka soo bixi, waxa samada ka soo dagi iyo waxa u kori, Alle na wuxuu idinku wehliyaa (cilmigiisa) meelkastood ku sugan tihiinba* waxaad camal falaysaanna Alle waa arkaa.

هُوَ ٱلَّذِى خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ فِى سِتَّةِ أَيَّامٍ ثُمَّ ٱسْتَوَىٰ عَلَى ٱلْعَرْشِ ۖ يَعْلَمُ مَا يَلِجُ فِى ٱلْأَرْضِ وَمَا يَخْرُجُ مِنْهَا وَمَا يَنزِلُ مِنَ ٱلسَّمَآءِ وَمَا يَعْرُجُ فِيهَا ۖ وَهُوَ مَعَكُمْ أَيْنَ مَا كُنتُمْ ۚ وَٱللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿٤﴾

لَّهُۥ مُلۡكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۚ وَإِلَى ٱللَّهِ تُرۡجَعُ ٱلۡأُمُورُ ٥

5. Alle ayaa iska leh xukunka samada iyo dhulka, xaggiisaana loo celin umuuraha.

يُولِجُ ٱلَّيۡلَ فِي ٱلنَّهَارِ وَيُولِجُ ٱلنَّهَارَ فِي ٱلَّيۡلِۚ وَهُوَ عَلِيمُۢ بِذَاتِ ٱلصُّدُورِ ٦

6. Alle waa kan habeenka iyo dharaarta is dhex galiya (kala badiya) waxa laabta ku jirana waa ogyahay.

Alle wuxuu mutaa sharrifaad iyo waynayn, maxaa yeelay isagaa ahaysiiyay khalqiga, wax walbana maamula, waana kan horreeyay dambaynna, xukunka iyo awoodda caalamkuna maamulkiisa ku hoos jiro, wax ka qarsoonna ma jiro, tasarrufkana isagaa iska leh, haddaadan adugu arkinna isagaa ku arka. **[Al-Xadiid: 1-6].**

* *(La jirid iyo wehel) ogaal iyo awood iyo kaalmo iyo ka warqab sida ay ku fasireen culumadii asaxaabta iyo intii wanaag ku raacday mana aha Ilaah baa naftiisii ku dhex jira meel kasta, waana ka hufan yahay sidaas, ee Alle waa ka sarreeyaa khalqigiisa. (Dib u eegaha).*

ءَامِنُواْ بِٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ وَأَنفِقُواْ مِمَّا جَعَلَكُم مُّسۡتَخۡلَفِينَ فِيهِۖ فَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ مِنكُمۡ وَأَنفَقُواْ لَهُمۡ أَجۡرٞ كَبِيرٞ ٧

7. Rumeeya Alle iyo Rasuulkiisa, bixiyana wax ka mid ah wuxuu idiinka dhigay wakiillo (maamulkiisa), kuwa rumeeyay Alle oo idinka mid ah waxna bixiyay waxay mudan ajir wayn.

وَمَا لَكُمۡ لَا تُؤۡمِنُونَ بِٱللَّهِ وَٱلرَّسُولُ يَدۡعُوكُمۡ لِتُؤۡمِنُواْ بِرَبِّكُمۡ وَقَدۡ أَخَذَ مِيثَٰقَكُمۡ إِن كُنتُم مُّؤۡمِنِينَ ٨

8. Maxaad leedihiin ood la rumayn waydeen Alle, isagoo Rasuulkuna idiinku yeedhi inaad rumaysaan Allihiin, isagoo Alle ballan idinka qaaday haddaad mu'miniin tihiin.

هُوَ ٱلَّذِي يُنَزِّلُ عَلَىٰ عَبۡدِهِۦٓ ءَايَٰتِۭ بَيِّنَٰتٖ لِّيُخۡرِجَكُم مِّنَ ٱلظُّلُمَٰتِ إِلَى ٱلنُّورِۚ وَإِنَّ ٱللَّهَ بِكُمۡ لَرَءُوفٞ رَّحِيمٞ ٩

9. Alle waa kan soo dajiyay aayaad cadcad si uu idiinka bixiyo mugdiga, nuurna idiinku bixiyo, Alle na waa idiin naxariis badan yahay.

وَمَا لَكُمۡ أَلَّا تُنفِقُواْ فِي سَبِيلِ ٱللَّهِ وَلِلَّهِ مِيرَٰثُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۚ

10. Maxaad leedihiin ood wax ugu bixin waydeen jidka Alle isagoo samaawaadka iyo dhulka

dhaxalkooda isla leeyahay, ma sinna ruux wax bixiyay maka furashadeedii ka hor oo jahaaday, kuwaasaa ka ajri wayn kuwii bixiyay oo dagaallamay ka dib, dhammaantoodna Alle wuxuu u yaboohay wanaag, Alle na waa ogyahay waxaad camal falaysaan.

لَا يَسْتَوِى مِنكُم مَّنْ أَنفَقَ مِن قَبْلِ ٱلْفَتْحِ وَقَٰتَلَ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ أَعْظَمُ دَرَجَةً مِّنَ ٱلَّذِينَ أَنفَقُوا۟ مِنۢ بَعْدُ وَقَٰتَلُوا۟ ۚ وَكُلًّا وَعَدَ ٱللَّهُ ٱلْحُسْنَىٰ ۚ وَٱللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرٌ ﴿١٠﴾

11. Waa kuma kan Alle amaah wanaagsan amaahin (wax bixin) oo markaas uu u laablaabo, ajri wanaagsanna hela.

مَّن ذَا ٱلَّذِى يُقْرِضُ ٱللَّهَ قَرْضًا حَسَنًا فَيُضَٰعِفَهُۥ لَهُۥ وَلَهُۥٓ أَجْرٌ كَرِيمٌ ﴿١١﴾

Rumaynta xaqa iyo daa'imkiisuba waa waajib, saasoo kale jidka Alle oo wax lugu bixiyo iyo jahaadkuba iyana waa waajib, maxaa yeelay cirka, dhulka iyo waxa ku suganba oy xooluhu ka mid yihiin Alle ayaa iska leh, ee dadka waxaa loo siiyay inay wanaag ku falaan, xumaantana ka reebaan.

Cabdullaahi binu Shakhiir waxaa laga wariyay inuu yidhi: waxaan u imid Rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) isagoo leh: «waxaa idin shuqliyay wax badsasho, ibnu Aadam wuxuu dhihi: xoolahaygii, oo miyaad ku leedahay xoolahaaga waxaad cunto ood dhammaysato, ama aad xidhato oo duugayso, ama aad sadaqaysato ood hormarsato mooyee? Wixii intaas ka soo hadhay waad ka tagi ood u dhaafi dad». Waxaa wariyay Muslim iyo imaamu Axmad.

Markaas waa inaan xaqa rumaynaa waxna bixinnaa illeen Rasuulkii iyo quraanka yaa wanaag inoogu yeedhiye, wax bixinta iyo jahaadka iyo camalkuna isku mid ma aha, ee waa kala tagsan yihiin marka la eego waqtiga iyo dhibaatada, inkastoo guud ahaan ay wanaag tahay, saas daraadeed yaa looga baahan yahay ruuxa mu'minka ah: rumayn xaqa, wax bixin, jahaad iyo camal fiican oo wax tara labada daaroodba. **[Al-Xadiid: 7-11].**

12. (Xusuusta) maalinta aad arki mu'miniinta rag iyo haweenba iyagoo nuurkoodu socdo hortooda iyo midigtooda, waxaana lagu dhihi bishaaraysta maanta, waa jannooyin ay dureeri dhexdooda wabiyaal iyagoo ku waari dhexdeeda, taasina waa liibaan wayn.

يَوْمَ تَرَى ٱلْمُؤْمِنِينَ وَٱلْمُؤْمِنَٰتِ يَسْعَىٰ نُورُهُم بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَبِأَيْمَٰنِهِم بُشْرَىٰكُمُ ٱلْيَوْمَ جَنَّٰتٌ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَا ۚ ذَٰلِكَ هُوَ ٱلْفَوْزُ ٱلْعَظِيمُ ﴿١٢﴾

13. Waa maalinta munaafiqiintu rag iyo haweenba ay ku dhihi kuwa xaqa rumeeyay na suga aan ka dhuxul qaadanno nuurkiinnee, waxaana lagu dhihi ku noqda gadaashiinna, waydiistana nuur, markaasaa la yeelaa dhexdooda darbi xaggiisa gudahana naxariis tahay, xaggiisa dibaddana caddibaad tahay.

يَوْمَ يَقُولُ ٱلْمُنَٰفِقُونَ وَٱلْمُنَٰفِقَٰتُ لِلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ٱنظُرُونَا نَقْتَبِسْ مِن نُّورِكُمْ قِيلَ ٱرْجِعُوا۟ وَرَآءَكُمْ فَٱلْتَمِسُوا۟ نُورًا ۖ فَضُرِبَ بَيْنَهُم بِسُورٍ لَّهُۥ بَابٌۢ بَاطِنُهُۥ فِيهِ ٱلرَّحْمَةُ وَظَٰهِرُهُۥ مِن قِبَلِهِ ٱلْعَذَابُ ﴿١٣﴾

14. Way u dhawaaqi mu'muniinta iyagoo leh miyaannaan idinla jirin, mu'miniintuna waxay ku dhihi: haa (waad nala jirteen) laakiin waxaad balayseen naftiinna, xumaanna waad la sugteen (Nabiga iyo mu'miniinta), waadna shakideen waxaana idinku kadisay yididiilo (been ah) inta amarka Alle ka yimaaddo (geerida) waxaana Alle idinku kadsiiyay kadiye (shaydaan).

يُنَادُونَهُمْ أَلَمْ نَكُن مَّعَكُمْ ۖ قَالُوا۟ بَلَىٰ وَلَٰكِنَّكُمْ فَتَنتُمْ أَنفُسَكُمْ وَتَرَبَّصْتُمْ وَٱرْتَبْتُمْ وَغَرَّتْكُمُ ٱلْأَمَانِىُّ حَتَّىٰ جَآءَ أَمْرُ ٱللَّهِ وَغَرَّكُم بِٱللَّهِ ٱلْغَرُورُ ﴿١٤﴾

15. Maanta (qiyaamada) laydin kama aqbalo is furasho idinka iyo kuwa gaaloobay midna, hoygiinnuna waa naar waadna mudataan, meel loo hoydana iyadaa u xun.

فَٱلْيَوْمَ لَا يُؤْخَذُ مِنكُمْ فِدْيَةٌ وَلَا مِنَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ ۚ مَأْوَىٰكُمُ ٱلنَّارُ ۖ هِىَ مَوْلَىٰكُمْ ۖ وَبِئْسَ ٱلْمَصِيرُ ﴿١٥﴾

Maalintaa waxaa la arki mu'miniinta rag iyo haweenba oo nuur hor socdo looguna bishaarayn wanaag. Munaafiqiintuse waa ka duwan tahay, waxayna la kulmi murug iyo xumaan, waxayna ka codsan mu'miniinta inay sugaan nuurkana wax ka siiyaan, hasa yeeshee daarta aakhiro nuur laguma qaato, waxaase lagu kasbadaa adduunka, ruuxse baloobay, oo xaqa shakiyay, oo yididiila been ah iyo shaydaan ku kadiyay intuu ka dhinto miyaa xoolo isku furasho iyo calaacal wax u tari maalinta qiyaame. **[Al-Xadiid: 12-15].**

16. Miyayan u dhawaannin kuwa xaqa rumeeyay inay u khushuucdo quluubtoodu xusidda Alle (quraanka) iyo waxa xaqa ah ee dagi, oyna la mid noqonin kuwii kitaabka la siiyay horay (yahuud iyo nasaaro) oo muddadu ku dheeraatay, markaas ay ingagtay quluubtoodu, wax badan oo ka mid ahna waa faasiqiin (ka baxay xerada).

* أَلَمْ يَأْنِ لِلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ أَن تَخْشَعَ قُلُوبُهُمْ لِذِكْرِ ٱللَّهِ وَمَا نَزَلَ مِنَ ٱلْحَقِّ وَلَا يَكُونُواْ كَٱلَّذِينَ أُوتُواْ ٱلْكِتَٰبَ مِن قَبْلُ فَطَالَ عَلَيْهِمُ ٱلْأَمَدُ فَقَسَتْ قُلُوبُهُمْ ۖ وَكَثِيرٌ مِّنْهُمْ فَٰسِقُونَ ﴿١٦﴾

17. Ogaada in Alle nooleeyo dhulka dhimasho ka dib, waana idiin caddeeynay aayaadka si aad wax u kastaan.

ٱعْلَمُوٓاْ أَنَّ ٱللَّهَ يُحْىِ ٱلْأَرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَا ۚ قَدْ بَيَّنَّا لَكُمُ ٱلْءَايَٰتِ لَعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ ﴿١٧﴾

18. Ragga wax sadaqaysta iyo haweenka wax sadaqaysta oo Alle na amaah wanaagsan amaahiya (waa sadaqada) waa loo laablaabi, waxayna leeyhiin ajri sharaf leh.

إِنَّ ٱلْمُصَّدِّقِينَ وَٱلْمُصَّدِّقَٰتِ وَأَقْرَضُواْ ٱللَّهَ قَرْضًا حَسَنًا يُضَٰعَفُ لَهُمْ وَلَهُمْ أَجْرٌ كَرِيمٌ ﴿١٨﴾

19. Kuwa rumeeyay Alle iyo Rasuulkiisa kuwaasu waa runbadanayaal, shuhadaduna Alle agtiisa ajri iyo nuur bay ku mudan kuwase gaaloobay beeniyayna aayaadkannaga kuwaasi waa ehelka naarta jaxiimo.

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ بِٱللَّهِ وَرُسُلِهِۦٓ أُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلصِّدِّيقُونَ ۖ وَٱلشُّهَدَآءُ عِندَ رَبِّهِمْ لَهُمْ أَجْرُهُمْ وَنُورُهُمْ ۖ وَٱلَّذِينَ كَفَرُواْ وَكَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِنَآ أُوْلَٰٓئِكَ أَصْحَٰبُ ٱلْجَحِيمِ ﴿١٩﴾

Ma habboona in ruuxa mu'minka ah waqtigu la dheeraado, qalbigiisuna halmaamo xusidda Alle iyo quraankiisa, waxaase habboon inuu Alle ku xidhnaado oosan la mid noqonin gaalada qalbigoodu ingagay ee faasiqiinta ah, isagoo xusuusan nicmooyinka Alle waxna bixin si uu uga helo Alle agtiisa ajri wayn, dhabtuna waxay tahay kuwa Alle rumeeya iyo Rasuulkiisa inay yihiin runlow-yaal, shahiidka xaqa ku dhintayna isagoo gaalada la jahaadi xuquuq-diisana difaaci, wuxuu ka mudan Alle agtiisa sharaf, ajri, iyo nuur. Gaalase iyo kuwa beeniya xaqaba waxay mudan naarta jaxiima.

Bukhaari iyo Muslim waxaa ku sugnaaday: «shuhadada arwaaxdoodu waxay ku sugan tahay cunaha shimbiro cagaaran oo jannada ka daaqi meeshey doonto». **[Al-Xadiid: 16-19].**

٢٠ ٱعْلَمُوٓاْ أَنَّمَا ٱلْحَيَوٰةُ ٱلدُّنْيَا لَعِبٌ وَلَهْوٌ وَزِينَةٌ وَتَفَاخُرٌۢ بَيْنَكُمْ وَتَكَاثُرٌ فِى ٱلْأَمْوَٰلِ وَٱلْأَوْلَٰدِ ۖ كَمَثَلِ غَيْثٍ أَعْجَبَ ٱلْكُفَّارَ نَبَاتُهُۥ ثُمَّ يَهِيجُ فَتَرَىٰهُ مُصْفَرًّا ثُمَّ يَكُونُ حُطَٰمًا ۖ وَفِى ٱلْءَاخِرَةِ عَذَابٌ شَدِيدٌ وَمَغْفِرَةٌ مِّنَ ٱللَّهِ وَرِضْوَٰنٌ ۚ وَمَا ٱلْحَيَوٰةُ ٱلدُّنْيَآ إِلَّا مَتَٰعُ ٱلْغُرُورِ ﴿٢٠﴾

20. Ogaada in nolosha adduunyadu tahay ciyaar iyo dheeldheel iyo isqurxin iyo isu faan dhexdiinna ah iyo badsi xoolo iyo carruur, sida roob uu beeraleyda cajab galiyey wuxuu soo bixiyo, markaasna ingaga ood arki isaga oo doorsoomay noqonna burbur; aakhirana waxaa jira caddibaad daran iyo dambidhaaf xagga Alle ka iman iyo raali ahaansho, nolosha adduunyana waa raaxo lugu kadsoomi.

٢١ سَابِقُوٓاْ إِلَىٰ مَغْفِرَةٍ مِّن رَّبِّكُمْ وَجَنَّةٍ عَرْضُهَا كَعَرْضِ ٱلسَّمَآءِ وَٱلْأَرْضِ أُعِدَّتْ لِلَّذِينَ ءَامَنُواْ بِٱللَّهِ وَرُسُلِهِۦ ۚ ذَٰلِكَ فَضْلُ ٱللَّهِ يُؤْتِيهِ مَن يَشَآءُ ۚ وَٱللَّهُ ذُو ٱلْفَضْلِ ٱلْعَظِيمِ ﴿٢١﴾

21. U orotama dambidhaafka Alle iyo janno balladhkeedu yahay balladhka samada iyo dhulka oo kale, loona darbay kuwa rumeeyay Alle iyo rasuulladiisa, arrintaasuna waa samafal Alle, wuxuuna siin ruuxuu doono, Alle na fadligiisu waa wayn yahay.

٢٢ مَآ أَصَابَ مِن مُّصِيبَةٍ فِى ٱلْأَرْضِ وَلَا فِىٓ أَنفُسِكُمْ إِلَّا فِى كِتَٰبٍ مِّن قَبْلِ أَن نَّبْرَأَهَآ ۚ إِنَّ ذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ يَسِيرٌ ﴿٢٢﴾

22. Wixii dhib ah oo dhulka ka dhaca ama naftiinna ku dhaca wuxuu ku sugnaaday kitaab abuuriddiisa ka hor, arrintaasuna waa u fududdahay Alle.

٢٣ لِّكَيْلَا تَأْسَوْاْ عَلَىٰ مَا فَاتَكُمْ وَلَا تَفْرَحُواْ بِمَآ ءَاتَىٰكُمْ ۗ وَٱللَّهُ لَا يُحِبُّ كُلَّ مُخْتَالٍ فَخُورٍ ﴿٢٣﴾

23. Si aydaan ugu murugoonnin wixii idinka taga aydaan uguna farxin wuxuu idin siiyo, Alle ma jecla ruux kasta oo isla wayn oo faan badan.

ٱلَّذِينَ يَبْخَلُونَ وَيَأْمُرُونَ ٱلنَّاسَ بِٱلْبُخْلِ ۗ وَمَن يَتَوَلَّ فَإِنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلْغَنِىُّ ٱلْحَمِيدُ ﴿٢٤﴾

24. Oo ah kuwa bakhayli dadkana fari bakhaylnimo, ruuxii jeedsadana Alle waa ka hodon ah, mahadsan.

Adduun iyo aakharaba Alle ayaa abuuray iskana leh, waana in adduunka la camalfalaa si aakhara loo nicmoobo, hasa yeeshee waa inaan adduunka uun loo go'in, illeen dhab ahaantii wuxuu la mid yahay dhul waraabay oo doog quruxsan ka soo dhashay, mudda ka dibna dabayshu marto oo ingaga kalana burbura, waxaabase intaa u sii dheer inay tahay ciyaar iyo dhalanteed ayan habboonayn in lagu kadsoomo.

Rasuulkuna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee): «ul meel la dhigto oo jannada ah yaa ka khayr roon addunyada iyo waxa ku sugan, akhriya: (nolosha adduunyo ma aha waxaan raaxo lagu kadsoomo ahayn). Waxaa wariyey Ibnu-Jariir, wuxuuna ku sugan yahay saxiix Bukhaari, marka laga reebo aayadda.

Saas daraadeed waa in la ogaado in Alle agtiisa wanaag iyo awoodiba taallo, wixii shar ahna loo adkaysto, khayrkana aan lala boodboodin. Cikrima wuxuu yidhi: «ruuxaan farxaynin ama murugoonaynin ma jiro, ee faraxa mahad ka dhiga murugtana sabir». **[Al-Xadiid: 20-24].**

لَقَدْ أَرْسَلْنَا رُسُلَنَا بِٱلْبَيِّنَٰتِ وَأَنزَلْنَا مَعَهُمُ ٱلْكِتَٰبَ وَٱلْمِيزَانَ لِيَقُومَ ٱلنَّاسُ بِٱلْقِسْطِ ۖ وَأَنزَلْنَا ٱلْحَدِيدَ فِيهِ بَأْسٌ شَدِيدٌ وَمَنَٰفِعُ لِلنَّاسِ وَلِيَعْلَمَ ٱللَّهُ مَن يَنصُرُهُۥ وَرُسُلَهُۥ بِٱلْغَيْبِ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ قَوِىٌّ عَزِيزٌ ﴿٢٥﴾

25. Dhab ahaan baan ula dirray rasuulladannadii xujooyin, waxaanna u soo dajinnay kutub iyo caddaalad, si dadku ugu tooso caddaalad, waxaanna soo dajinnay birta iyadoo shiddo ku dheehan tahay iyo nacfi dadka iyo in Alle ogaado cidda u gargaari isaga (diinta) iyo rasuulladiisa iyagoon arkaynin, Alle na waa xoog badane adkaade ah.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا نُوحًا وَإِبْرَٰهِيمَ وَجَعَلْنَا فِى ذُرِّيَّتِهِمَا ٱلنُّبُوَّةَ وَٱلْكِتَٰبَ ۖ فَمِنْهُم مُّهْتَدٍ ۖ وَكَثِيرٌ مِّنْهُمْ فَٰسِقُونَ ﴿٢٦﴾

26. Dhab ahaan baan u dirray (Nabi) Nuux iyo (Nabi) Ibraahim, waxaanna yeellay faracooda Nabinnimo iyo kitaabbo loo soo dajiyay, waxaana ka mid ah kuwa hanuunay, waxbadan oo ka mid ahna waa faasiqiin.

ثُمَّ قَفَّيْنَا عَلَىٰٓ ءَاثَـٰرِهِم بِرُسُلِنَا وَقَفَّيْنَا بِعِيسَى ٱبْنِ مَرْيَمَ وَءَاتَيْنَـٰهُ ٱلْإِنجِيلَ ۖ وَجَعَلْنَا فِى قُلُوبِ ٱلَّذِينَ ٱتَّبَعُوهُ رَأْفَةً وَرَحْمَةً ۚ وَرَهْبَانِيَّةً ٱبْتَدَعُوهَا مَا كَتَبْنَـٰهَا عَلَيْهِمْ إِلَّا ٱبْتِغَآءَ رِضْوَٰنِ ٱللَّهِ فَمَا رَعَوْهَا حَقَّ رِعَايَتِهَا ۖ فَـَٔاتَيْنَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ مِنْهُمْ أَجْرَهُمْ ۖ وَكَثِيرٌ مِّنْهُمْ فَـٰسِقُونَ ﴿٢٧﴾

27. Markaasaan raacinnay raadkoodii rasuulladannadii, waxaanna raacinnay Ciise binu Maryama, waxaanna siinnay Injiil, waxaanna yeellay quluubta kuwii raacay isudanqasho iyo naxariis iyo ruhbaaniyad (adduun ka jeedsi) ay iyagu billawdeen oonnaan ku faral yeelin, doonidda raalli ahaanshaha Alle dartiis yayna u faleen, mase ayna ilaalinin ilaalin xaq ah, waxaanna siinnay kuwii rumeeyay oo ka mid ah ajrigoodii, wax badan oo ka mid ahna waa faasiqiin.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ وَءَامِنُوا۟ بِرَسُولِهِۦ يُؤْتِكُمْ كِفْلَيْنِ مِن رَّحْمَتِهِۦ وَيَجْعَل لَّكُمْ نُورًا تَمْشُونَ بِهِۦ وَيَغْفِرْ لَكُمْ ۚ وَٱللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٢٨﴾

28. Kuwa xaqa rumeeyow Alle ka dhawrsada, rumeeyana Rasuulkiisa haydin siiyo laba-laab naxariiseede, hana idiin yeelo nuur aad ku socotaane, hana idiin dambidhaafee, Alle na waa dambidhaafe naxariista ah.

لِّئَلَّا يَعْلَمَ أَهْلُ ٱلْكِتَـٰبِ أَلَّا يَقْدِرُونَ عَلَىٰ شَىْءٍ مِّن فَضْلِ ٱللَّهِ وَأَنَّ ٱلْفَضْلَ بِيَدِ ٱللَّهِ يُؤْتِيهِ مَن يَشَآءُ ۚ وَٱللَّهُ ذُو ٱلْفَضْلِ ٱلْعَظِيمِ ﴿٢٩﴾

29. Inay ogaadaan ehlukitaabku inayan karin inay hantaan fadliga Alle, fadliguna Alle gacantiisa ayuu ku jiraa, wuxuuna siin ruuxuu doono, Alle na waa kan fadliga wayn leh.

Alle wuxuu diray rasuullo, wuxuuna la soo dajiyay kutub iyo xujooyin si caddaalad loogu dhaqmo, birta iyo hubkana Alle ayaa abuuray si cidda xaqa diidda loogu celiyo looguna nacfiyo, Nabiyada uu Alle soo dirayna sida Nuux iyo Ibraahiim faracyadoodii yuu raaciyay, siduu Ciisaba Injiil u siiyay, kuwii raacay ee xaqa ku toosnaana naxariis dhexdooda u yeelay hasa yeeshee ay isku adkeeyeen, waxyaalo cusubna la yimaadeen, xaqiina ayna dhawrin, badankooduna faasiqiin noqday. Saas daraadeed waa in Alle laga yaabaa, Rasuulkiisana la raacaa, si uu inoo siiyo ajri laab-laaban, nuur ina hoggaamiya, dambi-dhaaf iyo naxariis, lana ogaado inaan gaalo samafalka Alle ku tasarrufaynin ee Alle uun awood leeyahay, cidduu doonana khayr kuu ku shubaa. **[Al-Xadiid: 25-29].**

Suurat Al-Mujaadalah

سُورَةُ ٱلْمُجَادِلَةِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Alle wuxuu maqlay haweenaydii hadalkeeda Nabiga kula doodaysay xaalkii ninkeeda, oo Alle u sheeganaysay «dhibaatadeeda», Alle na wuu maqlayey doodooda, maxaa yeelay Ilaahay waa ka wax walba maqla oo arka.

قَدْ سَمِعَ ٱللَّهُ قَوْلَ ٱلَّتِي تُجَٰدِلُكَ فِي زَوْجِهَا وَتَشْتَكِيٓ إِلَى ٱللَّهِ وَٱللَّهُ يَسْمَعُ تَحَاوُرَكُمَآ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ سَمِيعٌۢ بَصِيرٌ ﴿١﴾

2. Kuwa haweenkooda kala mid dhiga hooyadood oo kale haweenkoodu ma aha hooyadood, hooyo waa midda wax dhashay, kuwaasina waxay ku hadlayaan hadal xun iyo been, Ilaahayna waa saamax badane dhaafid badane.

ٱلَّذِينَ يُظَٰهِرُونَ مِنكُم مِّن نِّسَآئِهِم مَّا هُنَّ أُمَّهَٰتِهِمْ ۖ إِنْ أُمَّهَٰتُهُمْ إِلَّا ٱلَّٰٓـِٔي وَلَدْنَهُمْ ۚ وَإِنَّهُمْ لَيَقُولُونَ مُنكَرًا مِّنَ ٱلْقَوْلِ وَزُورًا ۚ وَإِنَّ ٱللَّهَ لَعَفُوٌّ غَفُورٌ ﴿٢﴾

3. Kuwa haweenkooda kala mid dhigi hooyadood haddana ku noqon hadalkoodii, go'aansanna «haweenkii» u tegiddooda waxaa ku waajib ah qoor xoraynteed intayan istaaban, arrintaasi waa waano, Ilaahayna waxa dadku camal fali waa ogyahay.

وَٱلَّذِينَ يُظَٰهِرُونَ مِن نِّسَآئِهِمْ ثُمَّ يَعُودُونَ لِمَا قَالُوا۟ فَتَحْرِيرُ رَقَبَةٍ مِّن قَبْلِ أَن يَتَمَآسَّا ۚ ذَٰلِكُمْ تُوعَظُونَ بِهِۦ ۚ وَٱللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرٌ ﴿٣﴾

فَمَن لَّمْ يَجِدْ فَصِيَامُ شَهْرَيْنِ
مُتَتَابِعَيْنِ مِن قَبْلِ أَن يَتَمَآسَّا ۖ فَمَن لَّمْ
يَسْتَطِعْ فَإِطْعَامُ سِتِّينَ مِسْكِينًا ۚ ذَٰلِكَ
لِتُؤْمِنُوا۟ بِٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ ۚ وَتِلْكَ حُدُودُ
ٱللَّهِ ۗ وَلِلْكَٰفِرِينَ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٤﴾

4. Ruuxaan helin qoor uu xoreeyo wuxuu soomi laba bilood oo israacsan intayan istaaban, ciddiise aan karin soonka wuxuu quudin lixdan miskiin, arrintu waa saas si aad Alle u rumaysaan iyo Rasuulkiisa, taasina waa xudduuddii ilaahay gaalase waxaa u sugnaaday cadaab kulul.

Aayadahanu waxay ku soo degeen haweenay la dhihi jiray Khawlo iyo ninkeedii Aws binu Saamit oo ku yidhi: waxaad igala mid tahay hooyaday oo kale, markaasay Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) u timid iyadoo sheegan inay carruur badan leedahay ay doonaysana in ninkeedii lagu celiyo, saasna ay Nabiga hadalka isku celceliyeen. Ilaahay waa maqlaa waana ajiibaa ducada qofka dhibban sida haweenaydaas quraanku ku soo degay. Dhaartaas la soo sheegay waa mid jaahiliintii ku dhaaran jireen muslimiintana way ka reebban tahay waxaana ka waajibi kafaara gud. Caa'isha waxay tidhi: mahad Alle ayaa iska leh wax walbana maqla, waxaa timid haweeneydaas doodaysay anoo guriga dhinac ka mid ah jooga. Hadalkeeda qaaraa aanan maqleyn markaasaa Alle soo dajiyey aayadda. Waxaa wariyey Bukhaari. **[Al-Mujaadalah: 1-4].**

إِنَّ ٱلَّذِينَ يُحَآدُّونَ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ كُبِتُوا۟
كَمَا كُبِتَ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ ۚ وَقَدْ أَنزَلْنَآ
ءَايَٰتٍۭ بَيِّنَٰتٍ ۚ وَلِلْكَٰفِرِينَ عَذَابٌ
مُّهِينٌ ﴿٥﴾

5. Kuwa Alle iyo rasuulkiisa khilaafaya waa la dulleeyey sidii loo dulleeyay kuwii ka horreeyey, Alle na wuxuu soo dajiyey aayado cad cad, gaalana waxaa u sugnaaday cadaab ihaaneeya.

يَوْمَ يَبْعَثُهُمُ ٱللَّهُ جَمِيعًا فَيُنَبِّئُهُم بِمَا
عَمِلُوٓا۟ ۚ أَحْصَىٰهُ ٱللَّهُ وَنَسُوهُ ۚ وَٱللَّهُ عَلَىٰ
كُلِّ شَىْءٍ شَهِيدٌ ﴿٦﴾

6. Maalin buuna ihaanayn ilaahay uu soo bixin dhammaantood, ugana warrami waxay camal faleen, Alle na waa koobay iyana waa hilmaameen, ilahayna wax kasta wuu daalacan (arkaa).

أَلَمْ تَرَ أَنَّ ٱللَّهَ يَعْلَمُ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ
وَمَا فِى ٱلْأَرْضِ ۖ مَا يَكُونُ مِن نَّجْوَىٰ

7. Ma ogtahay in Ilaahay ogyahay cirka iyo dhulka waxa ku jira, seddexdii faqiba Ilaahay baa

afreeya, shantana ilaahay baa lixeeya; waxa ka yar iyo waxa ka badanba Ilaahaybaa la jira (oo cilmigiisa ku wehliya) meeshay ahaadaanba, wuxuuna uga warrami waxay camal faleen maalinta qiyaamo Ilaahayna wax walba waa ogyahay.

ثَلَٰثَةٍ إِلَّا هُوَ رَابِعُهُمْ وَلَا خَمْسَةٍ إِلَّا هُوَ سَادِسُهُمْ وَلَآ أَدْنَىٰ مِن ذَٰلِكَ وَلَآ أَكْثَرَ إِلَّا هُوَ مَعَهُمْ أَيْنَ مَا كَانُوا۟ ۖ ثُمَّ يُنَبِّئُهُم بِمَا عَمِلُوا۟ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمٌ ﴿٧﴾

8. Miyaadan ogayn kuwa laga reebay faqa xun oo haddana ku noqon waxa laga reebay, kuna faqi dambi iyo cadawnimo iyo caasinnimada Rasuulka, markay Nabiga u yimaadaanna ku salaamaya waxaan Alle ku salaamin oo hoos u dhihi maa Alle nagu cadaabo waxaan ku hadlayno, waxaa ku filan jahannamo oo ay galayaan waana guri xun.

أَلَمْ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ نُهُوا۟ عَنِ ٱلنَّجْوَىٰ ثُمَّ يَعُودُونَ لِمَا نُهُوا۟ عَنْهُ وَيَتَنَٰجَوْنَ بِٱلْإِثْمِ وَٱلْعُدْوَٰنِ وَمَعْصِيَتِ ٱلرَّسُولِ ۖ وَإِذَا جَآءُوكَ حَيَّوْكَ بِمَا لَمْ يُحَيِّكَ بِهِ ٱللَّهُ وَيَقُولُونَ فِىٓ أَنفُسِهِمْ لَوْلَا يُعَذِّبُنَا ٱللَّهُ بِمَا نَقُولُ ۚ حَسْبُهُمْ جَهَنَّمُ يَصْلَوْنَهَا ۖ فَبِئْسَ ٱلْمَصِيرُ ﴿٨﴾

9. Kuwa rumeeyayow markaad faqaysaan ha ku faqina dambi, colnimo iyo caasinnimada Rasuulka ee ku faqa wanaag dhawrsani, Alle na ka yaaba isagaa la isu soo kulmine.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ إِذَا تَنَٰجَيْتُمْ فَلَا تَتَنَٰجَوْا۟ بِٱلْإِثْمِ وَٱلْعُدْوَٰنِ وَمَعْصِيَتِ ٱلرَّسُولِ وَتَنَٰجَوْا۟ بِٱلْبِرِّ وَٱلتَّقْوَىٰ ۖ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ ٱلَّذِىٓ إِلَيْهِ تُحْشَرُونَ ﴿٩﴾

10. Faqa xun shaydaan buu ka yimaaddaa suu u walbahaar geliyo kuwa xaqa rumeeyay, waxbase kama dhibo idan Ilaahay mooyee, Ilaahay uun ha tala saarteen kuwa xaqa rumeeyey.

إِنَّمَا ٱلنَّجْوَىٰ مِنَ ٱلشَّيْطَٰنِ لِيَحْزُنَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَلَيْسَ بِضَآرِّهِمْ شَيْـًٔا إِلَّا بِإِذْنِ ٱللَّهِ ۚ وَعَلَى ٱللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ ٱلْمُؤْمِنُونَ ﴿١٠﴾

Alle iyo Rasuulkiisa ciddii la colloowda halaag baa u dambayn iyo cadaab daran, maxaa yeelay Alle wax walba waa ogyahay, waana in wanaag lagu faqo

een xumaan iyo colnimo lagu faqin, maxaa yeelay ruux kasta Alleheen waa la joogaa waana daalacan, isagaana loo noqon, cid kastana wuxuu ka abaal marin waxay kasbatay, Nabiguna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): hadday idin salaamaan ehelu kitaabka (gaaladu) dhaha korkiinna ha ahaato (waa saxiix). **[Al-Mujaadalah: 5-10].**

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِذَا قِيلَ لَكُمۡ تَفَسَّحُواْ فِي ٱلۡمَجَٰلِسِ فَٱفۡسَحُواْ يَفۡسَحِ ٱللَّهُ لَكُمۡۖ وَإِذَا قِيلَ ٱنشُزُواْ فَٱنشُزُواْ يَرۡفَعِ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ مِنكُمۡ وَٱلَّذِينَ أُوتُواْ ٱلۡعِلۡمَ دَرَجَٰتٖۚ وَٱللَّهُ بِمَا تَعۡمَلُونَ خَبِيرٞ ١١

11. Kuwa xaqa rumeeyayow haddii la idin dhaho isu waasiciya fadhiga; isu waasiciya, Ilaahay wanaagga ha idiin waasiciyee, marka la idin yiraahdo jihaadka iyo khayrka u degdegana; u degdega Ilaahay wuu koryeelayaa kuwa xaqa rumeeya kuwa cilmiga lehna darajooyin yuu koryeelayaa, Alle na waxa la camal fali waa ogyahay.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِذَا نَـٰجَيۡتُمُ ٱلرَّسُولَ فَقَدِّمُواْ بَيۡنَ يَدَيۡ نَجۡوَىٰكُمۡ صَدَقَةٗۚ ذَٰلِكَ خَيۡرٞ لَّكُمۡ وَأَطۡهَرُۚ فَإِن لَّمۡ تَجِدُواْ فَإِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٞ رَّحِيمٌ ١٢

12. Kuwa xaqa rumeeyayow markaad Nabiga qaabilaysan hormariya sadaqo, saasaa idiin khayr badan idiinna nadiifsan, haddaydaan helaynin Alle waa dambi dhaaf badane naxariis badane.

ءَأَشۡفَقۡتُمۡ أَن تُقَدِّمُواْ بَيۡنَ يَدَيۡ نَجۡوَىٰكُمۡ صَدَقَٰتٖۚ فَإِذۡ لَمۡ تَفۡعَلُواْ وَتَابَ ٱللَّهُ عَلَيۡكُمۡ فَأَقِيمُواْ ٱلصَّلَوٰةَ وَءَاتُواْ ٱلزَّكَوٰةَ وَأَطِيعُواْ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥۚ وَٱللَّهُ خَبِيرُۢ بِمَا تَعۡمَلُونَ ١٣

13. Ma waxaad ka cabsateen inaad hormarsataan sadaqooyin markaad Nabiga la kulmaysaan; haddaydaan saas falin Alle waa idin ka toobad aqbalaye ee salaadda ooga sakadana bixiya Ilaahay iyo Rasuulkiisana adeeca, Alle na waa ogyahay waxaad camal falaysaan.

Dadka xaqa rumeeyey waa inay Ilaahay iyo Nabigiisaba (naxariis iyo nabadgalyaba korkiisa Alle ha yeelee) ay maqlaan, dhexdoodana isu naxariistaan, jihaad ka iyo khayrkana u degdegaan, waxbarashada, salaadda, sakada iyo sadaqadana ay ku dadaalaan si uu Alle abaal gud fiican u siiyo. **[Al-Mujaadalah: 11-13].**

14. Ma ogtahay kuwii ka sokeeye dhigtay kuwa Alle u cadhooday kuwaasi idin ka mid ma aha iyagana ka mid ma aha (waa munaafiqiinta), waxayna ku dhaaran been iyagoo og.

15. Alle wuxuu u darbay kuwaas cadaab daran, maxaa yeelay wax xun bay falayeen.

16. Dhaartoodii bay gaashaan ka dhigteen dadkana xaqii bay ka leexiyeen waxayna mudan yihiin cadaab wax ihaaneeya.

17. Xoolahooda iyo caruurtoodu wax ugama taraan Alle xaggiisa, waana kuwa ehlu naar ah wayna ku waari.

18. Maalinta Alle soo bixiyo dhammaantood way u dhaaran Alle siday idinka idiinku dhaartaan iyagoo u malayn inay wax (xuja ah) haystaan, waase kuwo beenaalayaal ah.

19. Waxaa ka qaalib noqday shaydaan oo hilmaansiiyey xusidda Alle, kuwaasi waa xisbiga shaydaanka, xisbiga shaydaankuna waa kuwa khasaaray.

* أَلَمْ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ تَوَلَّوْا۟ قَوْمًا غَضِبَ
ٱللَّهُ عَلَيْهِم مَّا هُم مِّنكُمْ وَلَا
مِنْهُمْ وَيَحْلِفُونَ عَلَى ٱلْكَذِبِ وَهُمْ
يَعْلَمُونَ ﴿١٤﴾

أَعَدَّ ٱللَّهُ لَهُمْ عَذَابًا شَدِيدًا ۖ إِنَّهُمْ سَآءَ
مَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿١٥﴾

ٱتَّخَذُوٓا۟ أَيْمَٰنَهُمْ جُنَّةً فَصَدُّوا۟ عَن سَبِيلِ
ٱللَّهِ فَلَهُمْ عَذَابٌ مُّهِينٌ ﴿١٦﴾

لَّن تُغْنِىَ عَنْهُمْ أَمْوَٰلُهُمْ وَلَآ أَوْلَٰدُهُم
مِّنَ ٱللَّهِ شَيْـًٔا ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ أَصْحَٰبُ ٱلنَّارِ ۖ
هُمْ فِيهَا خَٰلِدُونَ ﴿١٧﴾

يَوْمَ يَبْعَثُهُمُ ٱللَّهُ جَمِيعًا فَيَحْلِفُونَ لَهُۥ
كَمَا يَحْلِفُونَ لَكُمْ وَيَحْسَبُونَ أَنَّهُمْ
عَلَىٰ شَىْءٍ ۚ أَلَآ إِنَّهُمْ هُمُ ٱلْكَٰذِبُونَ ﴿١٨﴾

ٱسْتَحْوَذَ عَلَيْهِمُ ٱلشَّيْطَٰنُ فَأَنسَىٰهُمْ ذِكْرَ
ٱللَّهِ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ حِزْبُ ٱلشَّيْطَٰنِ ۚ أَلَآ إِنَّ
حِزْبَ ٱلشَّيْطَٰنِ هُمُ ٱلْخَٰسِرُونَ ﴿١٩﴾

Munaafiqiintu waa colka kuwa xaqa rumeeyey, waxayna had iyo jeer xiriir la yeeshaan gaalada kale ayagoon labada qolo midna ka tirsanayn, kuwaasna Alle wuxuu ugu gooddiyey ciqaab daran, waana beenaalayaal xisbiga shaydaanka ka mid ah, naar iyo khasaarana way la kulmi doonaan. **[Al-Mujaadalah: 14-19].**

إِنَّ ٱلَّذِينَ يُحَآدُّونَ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥٓ أُوْلَٰٓئِكَ فِى ٱلْأَذَلِّينَ ﴿٢٠﴾

20. Kuwa Ilaahay iyo Rasuulkiisa khilaafaya waxay ka mid noqon kuwa dullooba.

كَتَبَ ٱللَّهُ لَأَغْلِبَنَّ أَنَا۠ وَرُسُلِىٓ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ قَوِىٌّ عَزِيزٌ ﴿٢١﴾

21. Alle wuxuu xugmiyey inuu adkaado isaga iyo rasuulladiisa, maxaa yeelay waa xoog badane adkaade ah.

لَّا تَجِدُ قَوْمًا يُؤْمِنُونَ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِ يُوَآدُّونَ مَنْ حَآدَّ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ وَلَوْ كَانُوٓا۟ ءَابَآءَهُمْ أَوْ أَبْنَآءَهُمْ أَوْ إِخْوَٰنَهُمْ أَوْ عَشِيرَتَهُمْ ۚ أُوْلَٰٓئِكَ كَتَبَ فِى قُلُوبِهِمُ ٱلْإِيمَٰنَ وَأَيَّدَهُم بِرُوحٍ مِّنْهُ ۖ وَيُدْخِلُهُمْ جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَا ۚ رَضِىَ ٱللَّهُ عَنْهُمْ وَرَضُوا۟ عَنْهُ ۚ أُوْلَٰٓئِكَ حِزْبُ ٱللَّهِ ۚ أَلَآ إِنَّ حِزْبَ ٱللَّهِ هُمُ ٱلْمُفْلِحُونَ ﴿٢٢﴾

22. Ma helaysid dad Ilaahay rumeeyey iyo maalintii dambeeysay oo haddana jecel ruux Ilaahay iyo Rasuulkiisa khilaafaya haba ahaadeen aabayowgood, caruurtooda, walaalahood ama qaraabadooda, kuwaas (aan jeclaanin) waa kuwo qalbigooda iimaanka lagu dhigay Alle na ku xoojiyey gargaarkiisa, wuxuuna gelin jannooyin wabiyaal dhex socdaan ay kuna waari, kuwaas Ilaahay baa ka raalli noqday iyana way ka raalli noqdeen, waana xisbiga Ilaahay; xisbiga Ilaahayna waa kuwa liibaanay.

Alle wuxuu ballan qaaday in dadka xaqa ku taagani adkaadaan markay wixii Alle faray yeelaan, xaqdiidayaashuna ay dulloobaan. Jacaylka iyo walaalnimaduna waa inay ahaato xaqa dartiis ee ayan noqonin sokeeyennimo qaraabo, kuwa ku walaalooba Alle dartiina waa xisbiga Ilaahay ee liibaanu u dambayn.

Rasuulkuna waxaa laga weriyay inuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): Allow ha ugu yeelin faajir iyo faasiq gacan iyo nicmo agtayda. mursal Xassan Basri. **[Al-Mujaadalah: 20-22].**

Suurat Al-Xashr

سُورَةُ الحَشْرِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

سَبَّحَ لِلَّهِ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلْأَرْضِ ۖ وَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿١﴾

1. Waxaa Alle nasaha (sharrifa) waxa cirka iyo dhulka ku dhex nool, waana xoog badane falsan.

هُوَ ٱلَّذِيٓ أَخْرَجَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ مِنْ أَهْلِ ٱلْكِتَٰبِ مِن دِيَٰرِهِمْ لِأَوَّلِ ٱلْحَشْرِ ۚ مَا ظَنَنتُمْ أَن يَخْرُجُوا۟ ۖ وَظَنُّوٓا۟ أَنَّهُم مَّانِعَتُهُمْ حُصُونُهُم مِّنَ ٱللَّهِ فَأَتَىٰهُمُ ٱللَّهُ مِنْ حَيْثُ لَمْ يَحْتَسِبُوا۟ ۖ وَقَذَفَ فِي قُلُوبِهِمُ ٱلرُّعْبَ يُخْرِبُونَ بُيُوتَهُم بِأَيْدِيهِمْ وَأَيْدِي ٱلْمُؤْمِنِينَ فَٱعْتَبِرُوا۟ يَٰٓأُو۟لِى ٱلْأَبْصَٰرِ ﴿٢﴾

2. Alle waa kan ka bixiyey kuwii gaaloobay ee ahlu kitaabka ahaa «yuhuud» guryahoodii kulmintii hore, idinkoon u malaynin inay bixi iyana waxay u maleeyeen in guryahoodu wax ka celin, markaasaa ciqaabkii Alle uga yimid meel ayan filayn, qalbigoodana wuxuu ku tuuray cabsi, guryahooda waxay ku kharribeen (ku halleeyeen) gacmahooda iyo gacmaha kuwa rumeeyey, ee dadka caqliga leh ha waano qaato.

وَلَوْلَآ أَن كَتَبَ ٱللَّهُ عَلَيْهِمُ ٱلْجَلَآءَ لَعَذَّبَهُمْ فِي ٱلدُّنْيَا ۖ وَلَهُمْ فِي ٱلْءَاخِرَةِ عَذَابُ ٱلنَّارِ ﴿٣﴾

3. Haddaan Alle xukumin inay baxaan waxaa lagu caddibi lahaa adduunka, aakhirana waxaa u sugnaaday cadaab naareed.

ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ شَآقُّوا۟ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ ۖ وَمَن يُشَآقِّ ٱللَّهَ فَإِنَّ ٱللَّهَ شَدِيدُ ٱلْعِقَابِ ﴿٤﴾

4. Maxaa yeelay Ilaahay iyo Rasuulkiisa yey khilaafeen, ruuxii Alle khilaafana ciqaabtiisu waa daran tahay.

5. Wixii aad gooysaan oo geed ah (ee cadawga) ama aad daysaan iyadoo ku taagan salkeeda waa idinka Alle iyo inuu dulleeyo faasiqiinta.

مَا قَطَعْتُم مِّن لِّينَةٍ أَوْ تَرَكْتُمُوهَا قَآئِمَةً عَلَىٰٓ أُصُولِهَا فَبِإِذْنِ ٱللَّهِ وَلِيُخْزِىَ ٱلْفَٰسِقِينَ ﴿٥﴾

Yuhuuddii magaalada Madiino joogtay yaa Nabiga (naxariis iyo nabadgelyo korkiisa Alle ha yeelee) khiyaantay, hase ahaatee waxaa u dambeeyey dulli iyo ciqaab illeen Ilaahay iyo Rasuulkiisa yey la colloobeen sida caadada yuhuudduba tahay had iyo jeer. Waana in lagu waano qaato xaalkaas jidka toosanna la qaadaa. **[Al-Xashr: 1-5].**

6. Wixii xoola ah ee Ilaahay Nabiga uga soo celiyo gaalada isagoon fardo iyo awr lagu dagaallamin waxaa amarkiisa leh Nabiga, Alle na cidduu doono yuu ku diraa rasuulladiisa (Nabi Muxammadna kuwan ayuu ku diray), wax walbana Alle waa karaa.

وَمَآ أَفَآءَ ٱللَّهُ عَلَىٰ رَسُولِهِۦ مِنْهُمْ فَمَآ أَوْجَفْتُمْ عَلَيْهِ مِنْ خَيْلٍ وَلَا رِكَابٍ وَلَٰكِنَّ ٱللَّهَ يُسَلِّطُ رُسُلَهُۥ عَلَىٰ مَن يَشَآءُ ۚ وَٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿٦﴾

7. Wixii xoola ah ee Ilaahay ku soo celiyo ee uga yimaadda degmooyinka yuhuudda Rasuulkiisa; waxaa leh Ilaahay, Rasuulka, qaraabada Nabiga, agoonta, masaakiinta iyo musaafiriinta «socdaalka» si ayan u noqon wax ku wareegaysta kuwa hodanka ah dhexdooda, wuxuu Rasuulku dadka siiyo ama faro waa inay qaataan, wuxuu ka reebana waa inay ka reebmaan, Alle na waa in laga dhawrsado, maxaa yeelay ciqaabtiisu waa daran tahay.

مَّآ أَفَآءَ ٱللَّهُ عَلَىٰ رَسُولِهِۦ مِنْ أَهْلِ ٱلْقُرَىٰ فَلِلَّهِ وَلِلرَّسُولِ وَلِذِى ٱلْقُرْبَىٰ وَٱلْيَتَٰمَىٰ وَٱلْمَسَٰكِينِ وَٱبْنِ ٱلسَّبِيلِ كَىْ لَا يَكُونَ دُولَةًۢ بَيْنَ ٱلْأَغْنِيَآءِ مِنكُمْ ۚ وَمَآ ءَاتَىٰكُمُ ٱلرَّسُولُ فَخُذُوهُ وَمَا نَهَىٰكُمْ عَنْهُ فَٱنتَهُوا۟ ۚ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ ۖ إِنَّ ٱللَّهَ شَدِيدُ ٱلْعِقَابِ ﴿٧﴾

8. Waxaa xoolahaas wax ku leh kuwa saboolka ah ee ka soo hijrooday guryahoodii iyo xoolahoodii dar Alle, waxayna

لِلْفُقَرَآءِ ٱلْمُهَٰجِرِينَ ٱلَّذِينَ أُخْرِجُوا۟ مِن دِيَٰرِهِمْ وَأَمْوَٰلِهِمْ يَبْتَغُونَ فَضْلًا مِّنَ ٱللَّهِ وَرِضْوَٰنًا وَيَنصُرُونَ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥٓ ۚ

u gargaarayaan Ilaahay iyo Rasuulkiisa, waana kuwa ku run sheegay iimaankooda.

أُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلصَّٰدِقُونَ ﴿٨﴾

Xoolaha gaalada si dagaal la'aan ah uga yimaadda waxaa loo yaqaan «feey» waxaana lagu bixin jidadka khayrka ah ee aayaddu tilmaantay, dadka xaqa rumeeyeyna waxaa ku waajib ah inay maqlaan hadalka Rasuulka «Muxamed» ah (naxariis iyo nabad gelyaba Alle korkiisa ha yeelee) waana in ciqaabta Alle laga dhawrsadaa. **[Al-Xashr: 6-8].**

9. Kuwii madiino deganaa ee xaqa rumeeyey waxay jecel yihiin dadka u soo hijroon, wax necbaansho ahna laabta uma geliyaan dadkaas waxa la siiyay, waxayna naftooda ka hormariyaan (ay uga doori) dadkaas inkastaba iyagu gaajo ha haysee, ruuxii laga dhawro bakhaylnimada naftiisa waa mid liibaanay.

وَٱلَّذِينَ تَبَوَّءُو ٱلدَّارَ وَٱلْإِيمَٰنَ مِن قَبْلِهِمْ يُحِبُّونَ مَنْ هَاجَرَ إِلَيْهِمْ وَلَا يَجِدُونَ فِى صُدُورِهِمْ حَاجَةً مِّمَّآ أُوتُواْ وَيُؤْثِرُونَ عَلَىٰٓ أَنفُسِهِمْ وَلَوْ كَانَ بِهِمْ خَصَاصَةٌ ۚ وَمَن يُوقَ شُحَّ نَفْسِهِۦ فَأُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْمُفْلِحُونَ ﴿٩﴾

10. Kuwa imaan asxaabta Nabiga ka dib waxay Alle weydiisan inuu u dambi dhaafo iyaga iyo walaalahooda iimaanka uga hormaray uusan qalbigoodana xiqdi ugu yeelin kuwa rumeeyey Allow waxaad tahay naxariis badane.

وَٱلَّذِينَ جَآءُو مِنۢ بَعْدِهِمْ يَقُولُونَ رَبَّنَا ٱغْفِرْ لَنَا وَلِإِخْوَٰنِنَا ٱلَّذِينَ سَبَقُونَا بِٱلْإِيمَٰنِ وَلَا تَجْعَلْ فِى قُلُوبِنَا غِلًّا لِّلَّذِينَ ءَامَنُواْ رَبَّنَآ إِنَّكَ رَءُوفٌ رَّحِيمٌ ﴿١٠﴾

Ansaartii Nabiga (naxariis iyo nabadgelyo korkiisa Alle ha yeelee) waxay ahaayeen duul la yaab leh, siday u jeclaayeen una taakuleeyeen muslimiintii soo hijrootay ee Maka ka soo qaxay Alle dartiis, iyagana naftooda uga doori jireen (Alle ha ka raalli noqdee) kuwa xaqa rumeeyey ee dib ka imaan waa inay jeclaadaan muslimiinta ka horreysay uguna duceeyaan dambi dhaaf iyo khayr illeen dadaal badan bay islaamka u sameeyeene. Nabigu wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): dulmi iska jira waa mugdiga qiyaame, bakhaylnimana iska jira iyadaa halaagtay kuwii idinka horeeyeye. Waxaa wariyey Muslim. **[Al-Xashr: 9-10].**

11. Ma ogtahay in kuwii munaafiqiinta ahaa ay ku dhihi kuwii gaaloobay ee yuhuudda ahaa haddii laydin bixiyo waan idinla jiraynaa cid aan idiin maqlaynana ma jirto waligeed, haddii laydinla dagaallamana waan idiin gargaaraynaa, Ilaahayna waa ogyahay inay beenaalayaal yihiin.

* أَلَمْ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ نَافَقُواْ يَقُولُونَ لِإِخْوَٰنِهِمُ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ مِنْ أَهْلِ ٱلْكِتَٰبِ لَئِنْ أُخْرِجْتُمْ لَنَخْرُجَنَّ مَعَكُمْ وَلَا نُطِيعُ فِيكُمْ أَحَدًا أَبَدًا وَإِن قُوتِلْتُمْ لَنَنصُرَنَّكُمْ وَٱللَّهُ يَشْهَدُ إِنَّهُمْ لَكَٰذِبُونَ ﴿١١﴾

12. Haddii la bixiyo yuhuuddda lama baxaayaan haddii lala dagaallamana uma gargaarayaan hadday isku dayaan inay u gargaaraanna way carari loomana gargaarayo.

لَئِنْ أُخْرِجُواْ لَا يَخْرُجُونَ مَعَهُمْ وَلَئِن قُوتِلُواْ لَا يَنصُرُونَهُمْ وَلَئِن نَّصَرُوهُمْ لَيُوَلُّنَّ ٱلْأَدْبَٰرَ ثُمَّ لَا يُنصَرُونَ ﴿١٢﴾

13. Mu'miniinta yey uga cabsi badan yihiin yuhuuddu Ilaahay, maxaa yeelay waa dad aan wax garad ahayn.

لَأَنتُمْ أَشَدُّ رَهْبَةً فِى صُدُورِهِم مِّنَ ٱللَّهِ ۚ ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ قَوْمٌ لَّا يَفْقَهُونَ ﴿١٣﴾

14. Kuwa xaqa rumeeyeyna lama dagaallami karaan «dhufaysyo iyo gidaarro dhexdood mooyee» dhibka dhexdooda ahna waa daran yahay, waxaad mooddaa inay wada jiraan, quluubtooduna waa kala tagsan tahay, maxaa yeelay waa dad aan wax kasayn.

لَا يُقَٰتِلُونَكُمْ جَمِيعًا إِلَّا فِى قُرًى مُّحَصَّنَةٍ أَوْ مِن وَرَآءِ جُدُرٍ ۚ بَأْسُهُم بَيْنَهُمْ شَدِيدٌ ۚ تَحْسَبُهُمْ جَمِيعًا وَقُلُوبُهُمْ شَتَّىٰ ۚ ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ قَوْمٌ لَّا يَعْقِلُونَ ﴿١٤﴾

Munaafiq had iyo jeer wuxuu la joogaa dhibka muslimiinta. Munaafiqiintii Madiino joogayna waxay gacan siin jireen yuhuudda oo ay ka dhigan jireen sokeeye labada qolobana waxay ahaayeen, yihiinna had iyo jeer colka diinta islaamka, waana laga adkaan haddii dad toosan oo xaqa rumeeyey la helo. Maxaa yeelay waa wax ma garad. **[Al-Xashr: 11-14].**

كَمَثَلِ ٱلَّذِينَ مِن قَبۡلِهِمۡ قَرِيبٗاۖ ذَاقُواْ وَبَالَ أَمۡرِهِمۡ وَلَهُمۡ عَذَابٌ أَلِيمٞ ١٥

15. Waxay la mid yihiin gaaladii dhawaa ee ka horreeyey ee dhadhamiyey cidhibtii camalkooda, cadaab daranna u sugnaaday.

كَمَثَلِ ٱلشَّيۡطَٰنِ إِذۡ قَالَ لِلۡإِنسَٰنِ ٱكۡفُرۡ فَلَمَّا كَفَرَ قَالَ إِنِّي بَرِيٓءٞ مِّنكَ إِنِّيٓ أَخَافُ ٱللَّهَ رَبَّ ٱلۡعَٰلَمِينَ ١٦

16. Waxay la mid yihiin shaydaan markuu qof ku yidhi gaalow, markuu gaaloobana ku yidhaah bari baan kaa ahay (waxba isuguma keen jiraan) oo sheegta inuu Ilaahay ka yaabi.

فَكَانَ عَٰقِبَتَهُمَآ أَنَّهُمَا فِي ٱلنَّارِ خَٰلِدَيۡنِ فِيهَاۚ وَذَٰلِكَ جَزَٰٓؤُاْ ٱلظَّٰلِمِينَ ١٧

17. Markaasay labadooduba cidhibtoodu noqon naar ay ku waaraan, daalimiintana saasaa lagu abaal mariyaa.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱتَّقُواْ ٱللَّهَ وَلۡتَنظُرۡ نَفۡسٞ مَّا قَدَّمَتۡ لِغَدٖۖ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَۚ إِنَّ ٱللَّهَ خَبِيرُۢ بِمَا تَعۡمَلُونَ ١٨

18. Kuwa xaqa rumeeyey waa inay Alle ka dhawrsadaan, nafwalbana waa inay eegtaa waxay u hormarsatay barri (qiyaamaha) Alle na ha laga yaabo illeen wax walba waa ogyahaye.

Kibir iyo islaweyni wax ma tarto, aaway kuwii iskibriyey ee beeniyey Nabiyadii ka horreeysay Nabi (Muxamed) (naxariis iyo nabad gelyo korkiisa Alle ha yeelee), gaaladuna waxbay dhumiyaan sida shaydaanka, ciddii wax dhumisa iyo midda la dhumiyaba waxay cidhibtoodu noqon khasaare iyo naar. **[Al-Xashr: 15-18].**

وَلَا تَكُونُواْ كَٱلَّذِينَ نَسُواْ ٱللَّهَ فَأَنسَىٰهُمۡ أَنفُسَهُمۡۚ أُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلۡفَٰسِقُونَ ١٩

19. Kuwa xaqa rumeeyey waa inayan noqon sidii kuwii Alle hilmaamay, isna markaas uu hilmaansiiyey naftooda, waana kuwo faasiqiin ah (xaqa ka leexday).

لَا يَسْتَوِيٓ أَصْحَٰبُ ٱلنَّارِ وَأَصْحَٰبُ ٱلْجَنَّةِ ۚ أَصْحَٰبُ ٱلْجَنَّةِ هُمُ ٱلْفَآئِزُونَ ﴿٢٠﴾

20. Ma eka ahlu naarka iyo ahlu jannaha, ahlu jannuhu waa kuwa liibaanay.

لَوْ أَنزَلْنَا هَٰذَا ٱلْقُرْءَانَ عَلَىٰ جَبَلٍ لَّرَأَيْتَهُۥ خَٰشِعًا مُّتَصَدِّعًا مِّنْ خَشْيَةِ ٱللَّهِ ۚ وَتِلْكَ ٱلْأَمْثَٰلُ نَضْرِبُهَا لِلنَّاسِ لَعَلَّهُمْ يَتَفَكَّرُونَ ﴿٢١﴾

21. Haddii quraankan Alle buur ku dejiyo (kula hadlo) waxaad arki lahayd buurtii oo khushuucsan oo dillaaci cabsi Alle darteed, saasaa Alle mataallo ugu sheegaa dadka inay fikiraan darteed.

هُوَ ٱللَّهُ ٱلَّذِى لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ۖ عَٰلِمُ ٱلْغَيْبِ وَٱلشَّهَٰدَةِ ۖ هُوَ ٱلرَّحْمَٰنُ ٱلرَّحِيمُ ﴿٢٢﴾

22. Ku xaq lugu caabudo oon Allaah ahayn ma jiro, waxa maqan iyo waxa joogaba waa ogyahay, waana kan naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

هُوَ ٱللَّهُ ٱلَّذِى لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ٱلْمَلِكُ ٱلْقُدُّوسُ ٱلسَّلَٰمُ ٱلْمُؤْمِنُ ٱلْمُهَيْمِنُ ٱلْعَزِيزُ ٱلْجَبَّارُ ٱلْمُتَكَبِّرُ ۚ سُبْحَٰنَ ٱللَّهِ عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿٢٣﴾

23. Ku xaq lugu caabudo oon Allaah ahayn ma jiro, waa Xaakim Daahir ah, Nabadgeliye, Rumeeye, wax walbana ilaaliye, xoog iyo weynaan isagaa leh, waana ka nasahan yahay waxay cibaadada la wadaajinayaan.

هُوَ ٱللَّهُ ٱلْخَٰلِقُ ٱلْبَارِئُ ٱلْمُصَوِّرُ ۖ لَهُ ٱلْأَسْمَآءُ ٱلْحُسْنَىٰ ۚ يُسَبِّحُ لَهُۥ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۖ وَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿٢٤﴾

24. Alle waa kan wax abuura ee ahaysiiya, sawirana, magacyo fiicanna wuu leeyahay, waxaana Alle u tasbiixsada (weyneeya) waxa cirka iyo dhulka ku sugan, waana adkaade falsame.

Ruuxa xaqa rumeeyey waa inuu had iyo jeer Alle xusaa kuna xirnaadaa, si aan Alle, naftiisa u hilmaansiin, jidka fiicanna waa inuu qaadaa illeen janno iyo naar ma sinnee, quraankan sharafta lehna waa inuu rumeeyaa kuna dhaqmaa, Ilaaha awoodda leh ee isaga mooyee ilaah kaloo xaq lugu caabudaa uusan jirinna waa inuu caabudaa oo rumeeyaa. **[Al-Xashr: 19-24].**

Suurat Al-Mumtaxinah

سُورَةُ ٱلْمُمْتَحَنَة

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تَتَّخِذُواْ عَدُوِّى
وَعَدُوَّكُمْ أَوْلِيَآءَ تُلْقُونَ إِلَيْهِم بِٱلْمَوَدَّةِ
وَقَدْ كَفَرُواْ بِمَا جَآءَكُم مِّنَ ٱلْحَقِّ
يُخْرِجُونَ ٱلرَّسُولَ وَإِيَّاكُمْ أَن تُؤْمِنُواْ
بِٱللَّهِ رَبِّكُمْ إِن كُنتُمْ خَرَجْتُمْ جِهَٰدًا
فِى سَبِيلِى وَٱبْتِغَآءَ مَرْضَاتِىۚ تُسِرُّونَ
إِلَيْهِم بِٱلْمَوَدَّةِ وَأَنَا۠ أَعْلَمُ بِمَآ أَخْفَيْتُمْ
وَمَآ أَعْلَنتُمْۚ وَمَن يَفْعَلْهُ مِنكُمْ فَقَدْ
ضَلَّ سَوَآءَ ٱلسَّبِيلِ ﴿١﴾

1. Kuwa xaqa rumeeyow ha ka dhigannina colka Alle iyo colkiinna (gaalada) sokeeye aad jacayl u gudbinaysaan, iyagoo ka gaaloobay xaqa idiin yimid, oo haddana bixiya Rasuulka iyo mu'uminiinta inaad Alle rumeeyseen darteed haddii soo bixiddiinnu ay ahayd jidka Allaah inaad ku jihaaddaan, raalli ahaanshadiisana rabtaan (gaala ha jeclaannina), kuwaas ood u qarisaan jacayl, Ilaahayna waa ogyahay waxaad qarinaysaan iyo waxaad muujinaysaanba, ruuxii saas yeelana jidka xaqa ah wuu ka dhumay.

إِن يَثْقَفُوكُمْ يَكُونُواْ لَكُمْ أَعْدَآءً
وَيَبْسُطُوٓاْ إِلَيْكُمْ أَيْدِيَهُمْ وَأَلْسِنَتَهُم
بِٱلسُّوٓءِ وَوَدُّواْ لَوْ تَكْفُرُونَ ﴿٢﴾

2. Hadday idin helaan (gaaladu) waxay idiin noqon col gacmaha iyo carrabkana xumaan bay idiinku taagi waxayna jecel yihiin inaad gaalowdaan.

لَن تَنفَعَكُمْ أَرْحَامُكُمْ وَلَآ
أَوْلَٰدُكُمْۚ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ يَفْصِلُ بَيْنَكُمْۚ
وَٱللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿٣﴾

3. Qaraabada iyo carruurtu waxba idiin ma taraan maalinta qiyaame waana laydin kala kaxayn, Ilaahayna waa arkaa waxaad camal falaysaan.

Colka Alle iyo colkaaga inaad saaxiib ka dhigataa ma habboona, gaaladuna waxay muslimiinta kula colloobeen waa diinta islaamka ah kaliya, ruuxii muslim sheegan oo gaalo cadaw ah jacayl u qariyana waa ruux dhumay oo leexday, gaaladana sokeeyannimo ma leh ee waa in saa lala socdaa. Aayaduhuna waxay soo dageen mar Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) uu u darbaday in Mako la soo furo markaas nin gaadhsiiyey ree Makaad arrintaas. **[Al-Mumtaxinah: 1-3].**

قَدْ كَانَتْ لَكُمْ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ فِىٓ إِبْرَٰهِيمَ وَٱلَّذِينَ مَعَهُۥٓ إِذْ قَالُوا۟ لِقَوْمِهِمْ إِنَّا بُرَءَٰٓؤُا۟ مِنكُمْ وَمِمَّا تَعْبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ كَفَرْنَا بِكُمْ وَبَدَا بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمُ ٱلْعَدَٰوَةُ وَٱلْبَغْضَآءُ أَبَدًا حَتَّىٰ تُؤْمِنُوا۟ بِٱللَّهِ وَحْدَهُۥٓ إِلَّا قَوْلَ إِبْرَٰهِيمَ لِأَبِيهِ لَأَسْتَغْفِرَنَّ لَكَ وَمَآ أَمْلِكُ لَكَ مِنَ ٱللَّهِ مِن شَىْءٍ ۖ رَّبَّنَا عَلَيْكَ تَوَكَّلْنَا وَإِلَيْكَ أَنَبْنَا وَإِلَيْكَ ٱلْمَصِيرُ ﴿٤﴾

4. Kuwa xaqa rumeeyey waa inay ku daydaan Nabi Ibraahim iyo kuwii la jiray waa kuwii iska bari yeelay gaaladii qoonkoodii ahayd (ay isla noolaayeen) iyo waxay caabudayeen ee Alle ka soo hadhay oy colnimo u muujiyeen ilaa ay Alle kaliya ka rumeeyaan, laakiin Nabi Ibraahim wuxuu u dambi dhaaf weydiiyey aabihiis, isagoon waxba u hanan karin (intaan laga reebin arrintaas). Alle yeynu talo saaran, isagaan u toobad keenaynaa, isagaana loo noqon (aakhiro).

رَبَّنَا لَا تَجْعَلْنَا فِتْنَةً لِّلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَٱغْفِرْ لَنَا رَبَّنَآ ۖ إِنَّكَ أَنتَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿٥﴾

5. Allow hannagu fidnaynin kuwa gaaloobay, noona dambi dhaaf illeen waxaad tahay Adkaade (Casiis) Falsan.

لَقَدْ كَانَ لَكُمْ فِيهِمْ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ لِّمَن كَانَ يَرْجُوا۟ ٱللَّهَ وَٱلْيَوْمَ ٱلْءَاخِرَ ۚ وَمَن يَتَوَلَّ فَإِنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلْغَنِىُّ ٱلْحَمِيدُ ﴿٦﴾

6. Haku daydo dadkaas dayasho wanaagsan ruuxii dooni Ilaahay iyo maalinta aakhiro, ciddiise ka jeedsata xaqa Alle waa ka kaaftoon yahay waana ammaanan yahay.

Ruuxa fiican ee sharafta leh ee Alle ka yaaba waxa wanaagsanna sameeya, xumaantana ka fogaada waa in lagu daydo sida kan xunba looga fogaado. Alle na waa in lagu xidhnaado loona toobad keeno, isagaa loo noqon gaaladana waa inaan la jeclaannin lagana digtoonaadaa. **[Al-Mumtaxinah: 4-6].**

7. Wuxuu Alle u dhaw yahay inuu yeelo jacayl mu'miniinta iyo kuway la colloobeen ee gaalada qureesheed ah dhexdooda, maxaa yeelay Alle wax walba waa karaa waana dambi dhaaf badane naxariis badane ah.

* عَسَى ٱللَّهُ أَن يَجۡعَلَ بَيۡنَكُمۡ وَبَيۡنَ ٱلَّذِينَ عَادَيۡتُم مِّنۡهُم مَّوَدَّةٗۚ وَٱللَّهُ قَدِيرٞۚ وَٱللَّهُ غَفُورٞ رَّحِيمٞ ٧

8. Alle kama reebayo kuwa xaqa rumeeyey inay u samo iyo caddaalad falaan kuwa aan diinta kula dagaallamin guryahoodana ka bixinnin, maxaa yeelay Alle waa jecel yahay kuwa caadiliinta ah (garsoor).

لَّا يَنۡهَىٰكُمُ ٱللَّهُ عَنِ ٱلَّذِينَ لَمۡ يُقَٰتِلُوكُمۡ فِي ٱلدِّينِ وَلَمۡ يُخۡرِجُوكُم مِّن دِيَٰرِكُمۡ أَن تَبَرُّوهُمۡ وَتُقۡسِطُوٓاْ إِلَيۡهِمۡۚ إِنَّ ٱللَّهَ يُحِبُّ ٱلۡمُقۡسِطِينَ ٨

9. Alle wuxuu ka reebi kuwa xaqa rumeeyey inay ka sokeeye yeeshaan oo xidhiidhiyaan kuwa diinta kula dagaallamay ee guryahoodii ka bixiyey gacanna ku siiyey in guryaha laga bixiyo, dadkii kuwaas sokeeye ka dhigtaa waa kuwa daalimiin ah.

إِنَّمَا يَنۡهَىٰكُمُ ٱللَّهُ عَنِ ٱلَّذِينَ قَٰتَلُوكُمۡ فِي ٱلدِّينِ وَأَخۡرَجُوكُم مِّن دِيَٰرِكُمۡ وَظَٰهَرُواْ عَلَىٰٓ إِخۡرَاجِكُمۡ أَن تَوَلَّوۡهُمۡۚ وَمَن يَتَوَلَّهُمۡ فَأُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلظَّٰلِمُونَ ٩

Alleheen isagaa awood leh, cidduu doonana wuu hanuuniyaa, waxaana dhacay in dad gaaladii qureesheed ka mid ah islaameen, wanaag iyo walaalnimana dhexmartay muslimiintii kale, waase inaan gaal kula dagaallamay wanaag loo samaynin, kuwase aan col muslimiinta la noqonnin gaaladana aan gacan ku siinnin dhibka muslimiinta ma reebbana in wanaag loo falo, taasina waxay ina tusin inaan kala garanno colkeenna iyo saaxiibkeenna.

Xadiith waxaa ku sugnaaday: kaad jeclaan tartiib u jeclow inaad nacdaa laga yaabaa, kaad necbaanna tartiib u nac inaad jeclaataa laga yaabaa maaline. Tirmidi ayaa soo saaray. **[Al-Mumtaxinah: 7-9].**

10. Kuwa xaqa rumeeyow hadday idiin yimaaddaan haween mu'minaad ah oo gaalada ka soo hijrooday (ka soo tegay)

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِذَا جَآءَكُمُ ٱلۡمُؤۡمِنَٰتُ مُهَٰجِرَٰتٖ فَٱمۡتَحِنُوهُنَّۖ ٱللَّهُ أَعۡلَمُ بِإِيمَٰنِهِنَّۖ فَإِنۡ عَلِمۡتُمُوهُنَّ

مُؤۡمِنَٰتٖ فَلَا تَرۡجِعُوهُنَّ إِلَى ٱلۡكُفَّارِۖ لَا هُنَّ حِلّٞ لَّهُمۡ وَلَا هُمۡ يَحِلُّونَ لَهُنَّۖ وَءَاتُوهُم مَّآ أَنفَقُواْۚ وَلَا جُنَاحَ عَلَيۡكُمۡ أَن تَنكِحُوهُنَّ إِذَآ ءَاتَيۡتُمُوهُنَّ أُجُورَهُنَّۚ وَلَا تُمۡسِكُواْ بِعِصَمِ ٱلۡكَوَافِرِ وَسۡـَٔلُواْ مَآ أَنفَقۡتُمۡ وَلۡيَسۡـَٔلُواْ مَآ أَنفَقُواْۚ ذَٰلِكُمۡ حُكۡمُ ٱللَّهِ يَحۡكُمُ بَيۡنَكُمۡۚ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٞ ١٠

imtixaana (inay ka dhab tahay iyo in kale) Alle ayaa og iimaankooda, haddaad ogaataan inay xaqa (dhabnimo) u rumeeyeen waa inaydaan gaalada u celinnin, maxaa yeelay xalaal isuma aha, meherkiina ha u celiyeen gaalada, inaad isguursataanna waxba kuma jiro haddaad meher siinaysaan, haweenka gaalooba nikaax isuguma kiin xirna ee ha haysannina, weydiista waxaad meher u bixiseen gaaladuna ha weydiisato waxay meher u bixiyeen, xaaladdaasina waa xukunka Alle uu dhexdiinna xukumay, Ilaahayna waa ogyahay (waxa la camal falo) waana falsame.

وَإِن فَاتَكُمۡ شَيۡءٞ مِّنۡ أَزۡوَٰجِكُمۡ إِلَى ٱلۡكُفَّارِ فَعَاقَبۡتُمۡ فَـَٔاتُواْ ٱلَّذِينَ ذَهَبَتۡ أَزۡوَٰجُهُم مِّثۡلَ مَآ أَنفَقُواْۚ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ ٱلَّذِيٓ أَنتُم بِهِۦ مُؤۡمِنُونَ ١١

11. Hadday u tagaan kuwa haweenkiinna ka mid ah gaalada (gaaloobaan) markaas ka dib aad gaaladii ka dabatagtaan oo aad xoolo ka soo qaniimaysataan hala siiyo kuwii haweenkoodu tageen meherki ay bixiyeen oo kale, Ilaaha aad rumaysan tihiinna ka dhawrsada.

Gaaladu waa inayan muslimiinta awood ku yeelannin, saas daraaddeed hadday soo islaamto haweenay ninkeedu gaal yahay looma celiyo, maxaa yeelay xalaal isuma aha, waase in la imtixaamo si runta loo ogaado, markaas ka dib hadday nin muslim ah guursato dhib kuma jiro iyadoo laysu celin wixii kharash ahaa, taasuna waxay ku tusin inay waajib tahay dhawritaanka sharafta islaamka iyo ruuxa muslimka ah, waxaa kale ooy ina tusin caddaaladda islaamka xataa mucaamilada gaalada. **[Al-Mumtaxinah: 10-11].**

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِيُّ إِذَا جَآءَكَ ٱلْمُؤْمِنَٰتُ يُبَايِعْنَكَ عَلَىٰٓ أَن لَّا يُشْرِكْنَ بِٱللَّهِ شَيْـًٔا وَلَا يَسْرِقْنَ وَلَا يَزْنِينَ وَلَا يَقْتُلْنَ أَوْلَٰدَهُنَّ وَلَا يَأْتِينَ بِبُهْتَٰنٍ يَفْتَرِينَهُۥ بَيْنَ أَيْدِيهِنَّ وَأَرْجُلِهِنَّ وَلَا يَعْصِينَكَ فِى مَعْرُوفٍ فَبَايِعْهُنَّ وَٱسْتَغْفِرْ لَهُنَّ ٱللَّهَ ۖ إِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٢﴾

12. Nabiyow hadday kuu yimaaddaan haween xaqa rumeeyey si ay kuugula ballantamaan inay Alle kaliya caabudaan, waxna xadin, sinaysanna, caruurtoodana dilin, been abuurna ayan la imaan, wax wanaag ah oo la farayna ayan Nabiga ku caasiyin la ballantan una dambi dhaaf weydii Alle waa dambi dhaafe naxariiste ahe.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تَتَوَلَّوْا۟ قَوْمًا غَضِبَ ٱللَّهُ عَلَيْهِمْ قَدْ يَئِسُوا۟ مِنَ ٱلْءَاخِرَةِ كَمَا يَئِسَ ٱلْكُفَّارُ مِنْ أَصْحَٰبِ ٱلْقُبُورِ ﴿١٣﴾

13. Kuwa xaqa rumeeyow haka sokeeye dhigannina kuwa Alle u carooday oo aakhirana ka quustay (waa gaaloo dhane) sida gaaladu uga quusatay kuwii dhintay.

Ruuxii xaqa rumeeyey oo la ballantama madaxda muslimka ah kuna ballan qaadi inuu xumaanta ka dheeraado wanaagna la yimaada waa in lala ballantamaa, sida Alleba faray Nabiga (naxariis iyo nabadgelyo Alle korkiisa ha yeelee) inuu haweenka muslimka ah ka oggolaado ballan qaadka, tan kale waa inaan gaalo Alle u carrooday oo aakhiro iyo maalinta abaal marinta ka quustay sokeeye iyo qaraabo laga dhigannin, illeen waxaa lugu walaaloobaa caqiidada islaamkee. **[Al-Mumtaxinah: 12-13].**

Suurat As-Saff

سُورَةُ الصَّفِّ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

سَبَّحَ لِلَّهِ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلْأَرْضِ ۖ وَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿١﴾

1. Waxaa Ilaahay nasaha (weyneeya) waxa cirka iyo dhulka ku sugan, Alle na waa adkaade falsan.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لِمَ تَقُولُونَ مَا لَا تَفْعَلُونَ ﴿٢﴾

2. Dadka xaqa rumeeyayow maxaad u sheegaysaan wax aydaan falaynin.

كَبُرَ مَقْتًا عِندَ ٱللَّهِ أَن تَقُولُوا۟ مَا لَا تَفْعَلُونَ ﴿٣﴾

3. Waxaa cadho weyn Alle agtiisa ku ah inaad sheegtaan wax aydaan falaynin.

إِنَّ ٱللَّهَ يُحِبُّ ٱلَّذِينَ يُقَٰتِلُونَ فِي سَبِيلِهِۦ صَفًّا كَأَنَّهُم بُنْيَٰنٌ مَّرْصُوصٌ ﴿٤﴾

4. Alle wuxuu jecel yahay kuwa ku dagaallama jidkiisa (jihaadka) iyagoo saf ah oo aad mooddo dhismo laysku dhejiyey (midnimadooda).

Samaawaatka iyo dhulkaba wax ku sugan Ilaaheen baa abuuray. Isagayna ka amar qaataan wayna u khushuucaan, maxaa yeelay isagaa awood leh, kuwa mu'miniinta ahna waa inay wax dhab ah qabtaan oo khayr ah ee ayan sheegannin wax ayan falaynin, maxaa yeelay taas Alle ma jecla, waana in jidka xaqa ah lagu jihaado si isku duubni ah, si gargaarka Alle iyo nasrigiisa loo helo.

Rasuulkuna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): calaamada munaafiqu waa saddex: hadduu ballamo wuu baajiyaa, hadduu sheekeeyana wuu been sheegaa, haddii la aaminana wuu khayaamaa. Waa saxiix. **[As-Saff: 1-4].**

وَإِذْ قَالَ مُوسَىٰ لِقَوْمِهِۦ يَٰقَوْمِ لِمَ تُؤْذُونَنِى وَقَد تَّعْلَمُونَ أَنِّى رَسُولُ ٱللَّهِ إِلَيْكُمْ ۖ فَلَمَّا زَاغُوٓا۟ أَزَاغَ ٱللَّهُ قُلُوبَهُمْ ۚ وَٱللَّهُ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلْفَٰسِقِينَ ﴿٥﴾

5. Xusuusta markii (Nabi) Muuse ku yidhi dadkiisii maxaad ii dhibaysaan idinkoo og inaan rasuul Alle idiin ahay, markay xaqii ka iisheen yaa Alle na sii iilay qalbigooda, Ilaahayna ma hanuuniyo kuwa faasiqiinta ah.

وَإِذْ قَالَ عِيسَى ٱبْنُ مَرْيَمَ يَٰبَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ إِنِّى رَسُولُ ٱللَّهِ إِلَيْكُم مُّصَدِّقًا لِّمَا بَيْنَ يَدَىَّ مِنَ ٱلتَّوْرَىٰةِ وَمُبَشِّرًۢا بِرَسُولٍ يَأْتِى مِنۢ بَعْدِى ٱسْمُهُۥٓ أَحْمَدُ ۖ فَلَمَّا جَآءَهُم بِٱلْبَيِّنَٰتِ قَالُوا۟ هَٰذَا سِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿٦﴾

6. Xusuusta marka (Nabi) Ciise ibnu Maryama ku yidhi banii israa'iil: waxaan ahay rasuul Alle idiin soo diray oo rumayn kitaabkii tawraad ee horreeyey, kuna bishaarayn rasuul gadaashayda imaan oo magaciisuna yahay «Axmed», markuu xuja cad ula yimidna waxay dheheen kani waa sixir cad.

Muslimiintu waxay rumayn Nabiyadii iyo rusushii Alle khalqiga u soo diray oo dhan, iyagoon kala qaadaynin, siday u rumeeyeen kutubta Alle ee saxa ah. Waxayna aayadahanu ina tusin in xaqu mid kaliya yahay, hase yeeshee gaaladu ay kala qaybiyaan si ay qaar u beeniyaan, waxaa kale oo ku cad aayadahan in Nabi Ciise ku bishaareeyey soo bixitaanka Nabi Muxamed (naxariis iyo nabadgelyo korkiisa Alle ha yeelee), taasina waxay xuja ku tahay gaalada Nabiga beenin. **[As-Saff: 5-6].**

وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنِ ٱفْتَرَىٰ عَلَى ٱللَّهِ ٱلْكَذِبَ وَهُوَ يُدْعَىٰٓ إِلَى ٱلْإِسْلَٰمِ ۚ وَٱللَّهُ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٧﴾

7. Yaa ka dulmi badan ruux ku been abuurtay Ilaahay isagoo loogu yeedhi islaamka, Alle ma hanuuniyo dadka daalimiinta ah.

يُرِيدُونَ لِيُطْفِـُٔوا۟ نُورَ ٱللَّهِ بِأَفْوَٰهِهِمْ وَٱللَّهُ مُتِمُّ نُورِهِۦ وَلَوْ كَرِهَ ٱلْكَٰفِرُونَ ﴿٨﴾

8. Waxay doonayaan (gaaladu) inay nuurka (xaqa) Alle ku bakhtiiyaan afkooda Alle na wuu taam yeeli nuurkiisa haba naceen gaaladuye.

9. Alle waa kan diray Rasuulkiisa isagoo hanuun wada iyo diin xaq ah si uu (Alle) diimaha oo dhan uga sare mariyo haba naceen mushrikiintuye (gaaladu).

هُوَ ٱلَّذِىٓ أَرۡسَلَ رَسُولَهُۥ بِٱلۡهُدَىٰ وَدِينِ ٱلۡحَقِّ لِيُظۡهِرَهُۥ عَلَى ٱلدِّينِ كُلِّهِۦ وَلَوۡ كَرِهَ ٱلۡمُشۡرِكُونَ ٩

Xaqoo la diidaa waa dulmi iyo gardarro, mana aha in ruuxii xaqa loogu yeedho ka abaal daro oo diiddo beenin kala soo horjeedsado, hasa ahaatee wuxuu Alle ballan qaaday in xaqu sare maro gaar ahaan hanuunkii uu dunida u soo saaray isagoo u soo dhiibay Rasuulkiisii Maxamed ahaa (naxariis iyo nabadgelyo Alle korkiisa ha yeelee), ruuxa caqliga lehna waxaa ku waajib ah in marka xaq iyo wanaag loogu yeero uu raacaa oo aqbalaa. **[As-Saff: 7-9].**

10. Kuwa xaqa rumeeyow ma idin tusiyaa ganacsi idinka koriya cadaab daran.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ هَلۡ أَدُلُّكُمۡ عَلَىٰ تِجَٰرَةٖ تُنجِيكُم مِّنۡ عَذَابٍ أَلِيمٖ ١٠

11. Waxaad rumaynaysaan Ilaahay iyo Rasuulkiisa waxaadna ku dagaallamaysaan jidkiisa xaqa ah xoolihiinna iyo naftiinna idinkoo u huri, saasaana idiin khayr roon haddaad tihiin kuwo wax og.

تُؤۡمِنُونَ بِٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ وَتُجَٰهِدُونَ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ بِأَمۡوَٰلِكُمۡ وَأَنفُسِكُمۡۚ ذَٰلِكُمۡ خَيۡرٞ لَّكُمۡ إِن كُنتُمۡ تَعۡلَمُونَ ١١

12. Markaas Alle dambigiinnuu dhaafi wuxuuna idin gelin jannooyin ay dhex socdaan webiyaal iyo guryo wanaagsan oo ku dhex yaalla jannada cadnin (nagaanshaha), taasina waa liibaan weyn.

يَغۡفِرۡ لَكُمۡ ذُنُوبَكُمۡ وَيُدۡخِلۡكُمۡ جَنَّٰتٖ تَجۡرِى مِن تَحۡتِهَا ٱلۡأَنۡهَٰرُ وَمَسَٰكِنَ طَيِّبَةٗ فِى جَنَّٰتِ عَدۡنٖۚ ذَٰلِكَ ٱلۡفَوۡزُ ٱلۡعَظِيمُ ١٢

13. Arrin kale ood jeceshihiinna (wuu idin siin) waa gargaarka Alle iyo fatxi (guul) dhaw, kuwa xaqa rumeeyeyna u bishaaree.

وَأُخۡرَىٰ تُحِبُّونَهَاۖ نَصۡرٞ مِّنَ ٱللَّهِ وَفَتۡحٞ قَرِيبٞۗ وَبَشِّرِ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ ١٣

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ كُونُوٓاْ أَنصَارَ ٱللَّهِ كَمَا قَالَ عِيسَى ٱبۡنُ مَرۡيَمَ لِلۡحَوَارِيِّـۧنَ مَنۡ أَنصَارِيٓ إِلَى ٱللَّهِۖ قَالَ ٱلۡحَوَارِيُّونَ نَحۡنُ أَنصَارُ ٱللَّهِۖ فَـَٔامَنَت طَّآئِفَةٞۖ مِّنۢ بَنِيٓ إِسۡرَٰٓءِيلَ وَكَفَرَت طَّآئِفَةٞۖ فَأَيَّدۡنَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ عَلَىٰ عَدُوِّهِمۡ فَأَصۡبَحُواْ ظَٰهِرِينَ ١٤

14. Dadka xaqa rumeeyow noqda gargaarayaasha Alle sidii kuwii Nabi Ciise ibnu Maryama saaxiibbadiis ahaa (xawaariyintii) ee uu ku yidhi yaa Alle iila gargaara, markaas ay dheheen annagaa ah gargaarayaashii Alle, ka dib ay xaqa rumaysay koox banii israa'iil ka mid ah, kooxna ay ka gaalawday; Alle na ayiday (xoojiyey) kuwii xaqa rumeeyey (kana adkaadeen cadawgoodii) oo iyagu ka muuqdeen (ka taliyeen) dhulkii.

Aayadahan waxay caddayn in ganacsiga ugu khayr badani ee dambiga lagu dhaafo jannana lagu galo uu yahay Alle iyo Rasuulkiisa oo la rumeeyo iyo jidkiisa oo lagu dagaallamo xoola iyo nafba, si loo daafaco xaqa loona helo nasri iyo guul, lana noqdo sidii xawaariyiintii (saaxiibbadii) Nabi Ciise, dhulkana loo hadho isagoo khayr lagu maamuli. **[As-Saff: 10-14].**

Suurat Al-Jumucah

سُورَةُ الجُمُعَةِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

يُسَبِّحُ لِلَّهِ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلْأَرْضِ ٱلْمَلِكِ ٱلْقُدُّوسِ ٱلْعَزِيزِ ٱلْحَكِيمِ ﴿١﴾

1. Waxaa Alle nasihi (weynayn) waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan, Ilaahay waa Xaakin xumaan ka daahirane ah Aadkaade Falsame ah.

هُوَ ٱلَّذِي بَعَثَ فِي ٱلْأُمِّيِّـۧنَ رَسُولًا مِّنْهُمْ يَتْلُوا۟ عَلَيْهِمْ ءَايَٰتِهِۦ وَيُزَكِّيهِمْ وَيُعَلِّمُهُمُ ٱلْكِتَٰبَ وَٱلْحِكْمَةَ وَإِن كَانُوا۟ مِن قَبْلُ لَفِي ضَلَٰلٍ مُّبِينٍ ﴿٢﴾

2. Alle waa kan u soo bixiyey kuwaan wax aqoon Rasuul ka mid ah oo ku akhriya korkooda aayaadkiisa kana daahiriya (gaalnimada iyo akhlaaqda xun, kuna barbaariya akhlaaqda wanaagsan), quraankana bara iyo sunnada (Nabiga) waxayna horey u ahaayeen kuwo baadi cad ku sugan.

وَءَاخَرِينَ مِنْهُمْ لَمَّا يَلْحَقُوا۟ بِهِمْ ۚ وَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿٣﴾

3. (Waxaa kale oo Alle Nabiga u diray) kuwo kale oon weli la kulmin kuwaas, Alle na waa Adkaade Falsame ah.

ذَٰلِكَ فَضْلُ ٱللَّهِ يُؤْتِيهِ مَن يَشَآءُ ۚ وَٱللَّهُ ذُو ٱلْفَضْلِ ٱلْعَظِيمِ ﴿٤﴾

4. Arrintaasuna (islaamka iyo Nabiga la soo diray) waa deeq Ilaah, wuxuuna siin ruuxuu doono Alle na waa deeq iyo fadli weyne.

Waxaa Ilaahay u khushuuca waxa uu ku abuuray cirka iyo dhulka, illeen isagaa awood leh, waana kan addoomadiisa wannagga u falay ee u soo diray Rasuul bani aadan ah, si uu u hanuuniyo waxna u baro, kuwa jooga iyo kuwa imaanba. Xaalkaasna waa xaal weyn oo khayr ah cidduu doono yuuna siiyaa, illeen waa deeq badanee. **[Al-Jumucah: 1-4].**

مَثَلُ ٱلَّذِينَ حُمِّلُواْ ٱلتَّوۡرَىٰةَ ثُمَّ لَمۡ يَحۡمِلُوهَا كَمَثَلِ ٱلۡحِمَارِ يَحۡمِلُ أَسۡفَارَۢاۚ بِئۡسَ مَثَلُ ٱلۡقَوۡمِ ٱلَّذِينَ كَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِۚ وَٱللَّهُ لَا يَهۡدِي ٱلۡقَوۡمَ ٱلظَّٰلِمِينَ ٥

5. Kuwii la faray inay kitaabka tawreed (ilaaliyaan) kuna camal falaan (waa yuhuudda) haddana aan ku camal falin, waxay la mid yihiin dameer xambaarsan kutub badan, waxaana xun masalka kuwaas beeniyey aayadaha Alle, Ilaahayna ma hanuuniyo kuwo daalimiin ah.

قُلۡ يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ هَادُوٓاْ إِن زَعَمۡتُمۡ أَنَّكُمۡ أَوۡلِيَآءُ لِلَّهِ مِن دُونِ ٱلنَّاسِ فَتَمَنَّوُاْ ٱلۡمَوۡتَ إِن كُنتُمۡ صَٰدِقِينَ ٦

6. Waxaad dhahdaa (Nabiyow) kuwa yuhuudda ahow haddaad sheegateen inaad tihiin awliyo Alle dadka kale ka sokow, geeri jeclaada haddaad run sheegaysaan.

وَلَا يَتَمَنَّوۡنَهُۥٓ أَبَدَۢا بِمَا قَدَّمَتۡ أَيۡدِيهِمۡۗ وَٱللَّهُ عَلِيمُۢ بِٱلظَّٰلِمِينَ ٧

7. Geerina ma jeclaanayaan weligood waxay hormarsadeen (oo gaf ah) dartiis, Alle na waa ogyahay kuwa daalimiinta ah.

قُلۡ إِنَّ ٱلۡمَوۡتَ ٱلَّذِي تَفِرُّونَ مِنۡهُ فَإِنَّهُۥ مُلَٰقِيكُمۡۖ ثُمَّ تُرَدُّونَ إِلَىٰ عَٰلِمِ ٱلۡغَيۡبِ وَٱلشَّهَٰدَةِ فَيُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمۡ تَعۡمَلُونَ ٨

8. Waxaad ku dhahdaa geerida aad ka cararaysaan way idinla kulmi, markaasaa laydiin celin Ilaah og waxa maqan iyo wax joogaba, markaasuu idiinka warrami (idinka jaasin) waxaad camal falayseen.

Waana in quraanka lagu camal falaa lana raacaa, si aan loola mid noqonnin yuhuuddii dayacday kitaabkii tawreed, markaas Alle ku maslay dameer kutub lagu raray, jeclaanshaha Ilaahayna wuxuu ku xidhan yahay sida loo caabudo

iyo sida loo falo wuxuu ku faray ee ma aha sheegasho inuu ku jecel yahay sida yuhuuddu fasho, saas daraaddeed waa in Alle si dhab ah loo caabudaa illeen isagaa loo noqone. **[Al-Jumucah: 5-8].**

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِذَا نُودِىَ لِلصَّلَوٰةِ مِن يَوْمِ ٱلْجُمُعَةِ فَٱسْعَوْاْ إِلَىٰ ذِكْرِ ٱللَّهِ وَذَرُواْ ٱلْبَيْعَ ۚ ذَٰلِكُمْ خَيْرٌ لَّكُمْ إِن كُنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿٩﴾

9. Kuwa xaqa rumeeyow marka laysugu yeedho salaadda maalinta jimcaha ah aada xusidda Alle, wax gadashadana ka taga, saasaa idiin khayr roon haddaad tihiin kuwo wax og.

فَإِذَا قُضِيَتِ ٱلصَّلَوٰةُ فَٱنتَشِرُواْ فِى ٱلْأَرْضِ وَٱبْتَغُواْ مِن فَضْلِ ٱللَّهِ وَٱذْكُرُواْ ٱللَّهَ كَثِيرًا لَّعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴿١٠﴾

10. Markase salaadda la dhammeeyo dhulka ku kala faafa, dalbana (doona) khayrka Alle, Ilaahayna xusa in badan waxaad u dhawdihiin inaad liibaantaan.

وَإِذَا رَأَوْاْ تِجَـٰرَةً أَوْ لَهْوًا ٱنفَضُّوٓاْ إِلَيْهَا وَتَرَكُوكَ قَآئِمًا ۚ قُلْ مَا عِندَ ٱللَّهِ خَيْرٌ مِّنَ ٱللَّهْوِ وَمِنَ ٱلتِّجَـٰرَةِ ۚ وَٱللَّهُ خَيْرُ ٱلرَّٰزِقِينَ ﴿١١﴾

11. Markay arkaan tijaaro (ganacsi) ama ciyaar (wax lagu shuqloomo) way aadaan, waxayna kaa tagaan Nabiyow adoo taagan (khudbo akhrin) waxaad dhahdaa waxa Alle agtiisa ah yaa ka khayr badan ciyaar iyo ganacsiba, Ilaahay waa kan ugu khayr badan inta wax arsaaqda.

Salaaddu waa tiirka labaad ee diinta islaamka, dadaalkeeduna waa waajib culus ama tan jumcada ha ahaato ruuxay ku waajibtay ama tan kalee maalin walba la tukado ha noqotee, waana inaan laga shuqloomin mar hadduu waqtigeedu galo, iyadoo ay waajib tahay in shaqada iyo kasabka xalaasha ah lagu dadaalo, aayadda kow iyo tobnaadna waxay ku soo degtay mar Nabigu (naxariis iyo nabadgelyo korkiisa Alle ha yeelee) uu khudbo jimco akhrinaayey oo safar badeeca wada soo galay Madiino, markaas dad asxaabtii ka mid ah aadeen, sida Alle sheegay khayrka agtiisa ah yaa ka wanaagsan ciyaar iyo ganasciba. Rasuulkana waxaa laga weriyay inuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): ruuxii hadla maalinta jumcada imaamkoo khudbada akhrin wuxuu la mid yahay dameer kutub xambaarsan. Ruuxii ku dhaha aamusna jumco uma jirto. Waxaa wariyey Imaam Axmad. Mana xoog badna. **[Al-Jumucah: 9-11].**

Suurat Al-Munaafiquun

سُورَةُ ٱلْمُنَٰفِقُونَ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

إِذَا جَآءَكَ ٱلْمُنَٰفِقُونَ قَالُوا۟ نَشْهَدُ إِنَّكَ لَرَسُولُ ٱللَّهِ ۘ وَٱللَّهُ يَعْلَمُ إِنَّكَ لَرَسُولُهُۥ ۗ وَٱللَّهُ يَشْهَدُ إِنَّ ٱلْمُنَٰفِقِينَ لَكَٰذِبُونَ ﴿١﴾

1. Markay kuu yimaadaan (Nabiyow) munaafiqiintu waxay dhihi waxaan marag ka nahay inaad tahay Rasuul Alle, Ilaahayna waa ogyahay inaad tahay Rasuulkiisii, Alle na wuxuu marag ka yahay inay munaafiqiintu beenaalayaal yihiin (xagga niyada).

ٱتَّخَذُوٓا۟ أَيْمَٰنَهُمْ جُنَّةً فَصَدُّوا۟ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ ۚ إِنَّهُمْ سَآءَ مَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿٢﴾

2. Dhaartooda (beenta ah) yey ka dhigteen gaashaan, dadkana waxay ka iileen jidkii Alle, waxay samaynna aad buu u xun yahay.

ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ ءَامَنُوا۟ ثُمَّ كَفَرُوا۟ فَطُبِعَ عَلَىٰ قُلُوبِهِمْ فَهُمْ لَا يَفْقَهُونَ ﴿٣﴾

3. Saas waxaa ugu wacan inay (xagga muuqa) rumeeyeen haddana (hoosta) ka gaaloobeen, quluubtoodana waa la daabacay (la daboolay) wax xaq ahna ma kasayaan.

* وَإِذَا رَأَيْتَهُمْ تُعْجِبُكَ أَجْسَامُهُمْ ۖ وَإِن يَقُولُوا۟ تَسْمَعْ لِقَوْلِهِمْ ۖ كَأَنَّهُمْ خُشُبٌ مُّسَنَّدَةٌ ۖ يَحْسَبُونَ كُلَّ صَيْحَةٍ عَلَيْهِمْ ۚ هُمُ ٱلْعَدُوُّ فَٱحْذَرْهُمْ ۚ قَٰتَلَهُمُ ٱللَّهُ ۖ أَنَّىٰ يُؤْفَكُونَ ﴿٤﴾

4. Haddaad aragto munaafiqiinta waad la yaabi jidhkooda, iyo muuqooda, hadday hadlaanna waad dhagaysan hadalkooda, waxaadse mooddaa dogobyo la tiirtiiriyey, qayladii yeedhabana way ka cabsadaan, waa col

kuwaasi, Alle na ha lacnado ee xaggee loo duufsan.

Suuraddani waxay ka sheekayn munaafiqiinta iyo xumaatadooda, maxaa yeelay xagga muuqaalka waxay sheegan inay xaqa rumeeyeen, xagga hoosana waxay islaamka ula joogaan colnimo iyo xumaan, kuwaasi waa ahlu naaree yeyna kugu khaldin bidhaanta iyo afka macaan ee suntu ka hoosayso. **[Al-Munaafiquun: 1-4].**

5. Marka lagu dhaho munaafiqiinta kaalaya ha idiin dambi dhaaf weydiiyee Rasuulka Alle waxay ruxaan madaxa (diiddo darteed) waxaad aragtaa iyagoo jeedsan oo iskibrin.

وَإِذَا قِيلَ لَهُمْ تَعَالَوْا۟ يَسْتَغْفِرْ لَكُمْ رَسُولُ ٱللَّهِ لَوَّوْا۟ رُءُوسَهُمْ وَرَأَيْتَهُمْ يَصُدُّونَ وَهُم مُّسْتَكْبِرُونَ ﴿٥﴾

6. Waa isku mid haddaad u dambi dhaaf weydiisid (Nabiyow) iyo haddii kale, marnaba Alle u dambi dhaafi mahayo, maxaa yeelay Alle ma hanuuniyo dad faasiqiin ah.

سَوَآءٌ عَلَيْهِمْ أَسْتَغْفَرْتَ لَهُمْ أَمْ لَمْ تَسْتَغْفِرْ لَهُمْ لَن يَغْفِرَ ٱللَّهُ لَهُمْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلْفَٰسِقِينَ ﴿٦﴾

7. Waa kuwa dhihi (munaafiqiintu) ha quudininna kuwa Rasuulka la jooga intay ka kala tagaan, Alle ayaa iska leh khasnadaha samaawaatka iyo dhulka, hase yeeshee munaafiqiintu ma fahansana.

هُمُ ٱلَّذِينَ يَقُولُونَ لَا تُنفِقُوا۟ عَلَىٰ مَنْ عِندَ رَسُولِ ٱللَّهِ حَتَّىٰ يَنفَضُّوا۟ ۗ وَلِلَّهِ خَزَآئِنُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَلَٰكِنَّ ٱلْمُنَٰفِقِينَ لَا يَفْقَهُونَ ﴿٧﴾

8. Munaafiqiintu waa kuwa dhihi haddaan Madiino u noqonno waa in kuwa tabarta lihi ka bixiyaan magaalada kuwa dullaysan, tabar iyo sharaf Alle ayaa iska leh Rasuulkiisa iyo mu'miniinta, hase yeeshee munaafiqiintu ma oga.

يَقُولُونَ لَئِن رَّجَعْنَآ إِلَى ٱلْمَدِينَةِ لَيُخْرِجَنَّ ٱلْأَعَزُّ مِنْهَا ٱلْأَذَلَّ ۚ وَلِلَّهِ ٱلْعِزَّةُ وَلِرَسُولِهِۦ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَلَٰكِنَّ ٱلْمُنَٰفِقِينَ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٨﴾

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تُلۡهِكُمۡ أَمۡوَٰلُكُمۡ وَلَآ أَوۡلَٰدُكُمۡ عَن ذِكۡرِ ٱللَّهِۚ وَمَن يَفۡعَلۡ ذَٰلِكَ فَأُوْلَـٰٓئِكَ هُمُ ٱلۡخَٰسِرُونَ ٩

9. Kuwa xaqa rumeeyow yaanay idin ka shuqlinin xoolihiinnu iyo caruurtiinnu xuska Alle (daacaddiisa) ciddii saas fashaana waa mid khasaartay.

وَأَنفِقُواْ مِن مَّا رَزَقۡنَـٰكُم مِّن قَبۡلِ أَن يَأۡتِيَ أَحَدَكُمُ ٱلۡمَوۡتُ فَيَقُولَ رَبِّ لَوۡلَآ أَخَّرۡتَنِيٓ إِلَىٰٓ أَجَلٖ قَرِيبٖ فَأَصَّدَّقَ وَأَكُن مِّنَ ٱلصَّٰلِحِينَ ١٠

10. Bixiyana wax ka mid ah waxa Alle idinku arsuqay geerida horteeda oo markaas uu yiraahdo (ruuxaan wax baxsan) Allow maad muddo dhow dib ii dhigtid oon sadaqaysto kuwa suubbanna aan ka mid noqdee.

وَلَن يُؤَخِّرَ ٱللَّهُ نَفۡسًا إِذَا جَآءَ أَجَلُهَاۚ وَٱللَّهُ خَبِيرُۢ بِمَا تَعۡمَلُونَ ١١

11. Naf malaggeed galayna Alle dib uma dhigo, Ilaahayna waa ogyahay waxaad camal falaysaan.

Isla waynidu waa xun tahay, mana aha in ruux caqli lihi diido in wanaagga loogu yeedho, hase yeeshee arrinta Ilaahay baa maamula risqigana isagaa bixiya ee ma aha siday munaafiqiintu moodeen, tan kale waa inaan xoolaha iyo carruurtu sabab u noqonnin Alle ka fogaansho, illeen waa khasaare saasiye, waana in wax la baxsadaa geeri ka hor si dadka suubban looga mid noqdo oon hadhowna loo calaacalin, illeen naf malaggeed galay Alle ma sugee. Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: ruuxii leh xoola gaadhsiiya xajka baydka Alle ama zako ku waajibtoo aan falin wuxuu Alle warsan markuu dhiman in loo celiyo adduunkii. **[Al-Munaafiquun: 5-11].**

Suurat At-Taghaabun

سُورَةُ التَّغَابُنِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

يُسَبِّحُ لِلَّهِ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلْأَرْضِ ۖ لَهُ ٱلْمُلْكُ وَلَهُ ٱلْحَمْدُ ۖ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿١﴾

1. Waxaa Alle nasaha (weyneeya) waxa samaawaatka (cirka) iyo dhulka ku sugan awood iyo mahadbana Alle ayaa iska leh, wax walbana isagaa kara.

هُوَ ٱلَّذِي خَلَقَكُمْ فَمِنكُمْ كَافِرٌ وَمِنكُم مُّؤْمِنٌ ۚ وَٱللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ ﴿٢﴾

2. Alle waa kan idin abuuray qaarkiinna gaaluu noqday, qaarkiinna mu'miniin, Alle na waxaad camal falaysan waa arkaa.

خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ بِٱلْحَقِّ وَصَوَّرَكُمْ فَأَحْسَنَ صُوَرَكُمْ ۖ وَإِلَيْهِ ٱلْمَصِيرُ ﴿٣﴾

3. Samaawaatka (cirka) iyo dhulkaba wuxuu Alle u abuuray si xaq ah, wuuna idin sawiray Alle dadoow, suuraddiinnana wuu wanaajiyey, isagaana loo noqon (aakhiro).

يَعْلَمُ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَيَعْلَمُ مَا تُسِرُّونَ وَمَا تُعْلِنُونَ ۚ وَٱللَّهُ عَلِيمٌۢ بِذَاتِ ٱلصُّدُورِ ﴿٤﴾

4. Wuxuu ogyahay waxa samaawaatka (cirka) iyo dhulka ku sugan, wuxuuna ogyahay waxaad qarinaysaan iyo waxaad muujinaysaan, Alle na waa ogyahay waxa laabta (qalbiga) ku jira.

Alle waxaa u khushuuca una hoggaansama awooddiisa waxa ku sugan cirka iyo dhulka sida aayado badan sheegeen, isagaana mahad iyo qudradba iska leh, bani Aadamkana isagaa abuuray jidkana tusiyey samaan iyo xumaanba,

abuurka Alle na ciyaar ma aha ee waa xigmo iyo imtixaan, waxa dadku camal falana waa ogyahay dhammaantiis, saas daraaddeed waa in niyada iyo qalbigaba la daahiriyo, Allana la weeyneeyo illeen isagaa awood leh loona noqone. **[At-Taghaabun: 1-4].**

أَلَمْ يَأْتِكُمْ نَبَؤُاْ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ مِن قَبْلُ فَذَاقُواْ وَبَالَ أَمْرِهِمْ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٥﴾

5. Miyuuna idin soo gaarin warkii kuwii gaaloobay ee horreeyey, waxay dhadhamiyeen xumaantii camalkoodii, waxaana u sugnaaday caddibaad daran.

ذَٰلِكَ بِأَنَّهُۥ كَانَت تَّأْتِيهِمْ رُسُلُهُم بِٱلْبَيِّنَٰتِ فَقَالُوٓاْ أَبَشَرٌ يَهْدُونَنَا فَكَفَرُواْ وَتَوَلَّواْ ۖ وَّٱسْتَغْنَى ٱللَّهُ ۚ وَٱللَّهُ غَنِىٌّ حَمِيدٌ ﴿٦﴾

6. Arrintaas waxaa ugu wacan in rasuullo ula yimaadeen xujooyin ayna dheheen (gaaladii) ma dadbaa na hanuunin ayna gaaloobeen oo jeedsadeen, iyadoo Allana ka deeqtoonaa marki horeba (iyaga iyo iimaankoodaba), Alle na waa midka hodanka ah lana mahadiyo.

زَعَمَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓاْ أَن لَّن يُبْعَثُواْ ۚ قُلْ بَلَىٰ وَرَبِّى لَتُبْعَثُنَّ ثُمَّ لَتُنَبَّؤُنَّ بِمَا عَمِلْتُمْ ۚ وَذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ يَسِيرٌ ﴿٧﴾

7. Waxay sheegeen kuwii gaaloobay inaan la soo bixinaynin, waxaad dhahdaa: saas ma aha, Alle Ayaan ku dhaartay in la idin soo bixin laydinkana warrami waxaad camal fasheen, taasina waa u fududdahay Alle.

فَـَٔامِنُواْ بِٱللَّهِ وَرَسُولِهِۦ وَٱلنُّورِ ٱلَّذِىٓ أَنزَلْنَا ۚ وَٱللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرٌ ﴿٨﴾

8. Ee rumeeya Alle iyo Rasuulkiisa iyo nuurka Alle soo dejiyey (quraanka), Alle na waxaad camal falaysaan waa ogyahay.

يَوْمَ يَجْمَعُكُمْ لِيَوْمِ ٱلْجَمْعِ ۖ ذَٰلِكَ يَوْمُ ٱلتَّغَابُنِ ۗ وَمَن يُؤْمِنۢ بِٱللَّهِ وَيَعْمَلْ صَٰلِحًا يُكَفِّرْ عَنْهُ سَيِّـَٔاتِهِۦ وَيُدْخِلْهُ جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ

9. Maalinta qiyaamada ee Ilaahay idinsoo kulmin waa maalin kado (oo la dareemo inaan laga faa'iideysan fursadihii la haystay), ruuxiise Ilaah rumeeya camal wanaagsanna fala Alle

خَٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدًا ۚ ذَٰلِكَ ٱلْفَوْزُ ٱلْعَظِيمُ ﴿٩﴾

xumaantiisa (dambigiisa) wuu asturi, wuxuuna galin jannooyin ay dhex dureeraan wabiyaal way kuna waaraan waligood, taasina waa liibaan weyn.

وَٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَكَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَآ أُو۟لَٰٓئِكَ أَصْحَٰبُ ٱلنَّارِ خَٰلِدِينَ فِيهَا ۖ وَبِئْسَ ٱلْمَصِيرُ ﴿١٠﴾

10. Kuwa gaaloobayse beeniyeyna aayaadka Alle waa kuwa ahlu naar ah waxayna ku waari dhexdeeda, meel loo ahaadana iyadaa u xun.

Warkii ummaddii hore waxaa looga dan leeyahay in lagu waano qaato lagana leexdo jidkoodii xumaa ee xaq diidka iyo madax adaygga ahaa, lana rumeeyo quraanka nuurka Alle ah iyo xaqoo dhan si Alle maalinta qiyaame ee kulminta naxariis iyo jannooyin inoo siiyo loona gaadho liibaan Alle, lagana nabad galo naar daran oo loo darbay xaq diidayaasha. Muqaatilna wuxuu yidhi: ma jiro khasaare ka weyn in kuwaasina jannada galaan kuwaasina lala aado naarta. **[At-Taghaabun: 5-10].**

مَآ أَصَابَ مِن مُّصِيبَةٍ إِلَّا بِإِذْنِ ٱللَّهِ ۗ وَمَن يُؤْمِنۢ بِٱللَّهِ يَهْدِ قَلْبَهُۥ ۚ وَٱللَّهُ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمٌ ﴿١١﴾

11. Wixii musiiba ah (dhib ah) oo dhaca waa idanka Alle, ruuxiise Alle rumeeya waxaa Alle hanuunin (oo xasilin) qalbigiisa, Alle na wax walba waa ogyahay.

وَأَطِيعُوا۟ ٱللَّهَ وَأَطِيعُوا۟ ٱلرَّسُولَ ۚ فَإِن تَوَلَّيْتُمْ فَإِنَّمَا عَلَىٰ رَسُولِنَا ٱلْبَلَٰغُ ٱلْمُبِينُ ﴿١٢﴾

12. Alle adeeca Rasuulkiisana adeeca, haddaadse jeedsataan (xaqa diiddaan) waxaa Rasuulka saaran uun inuu si cad wax u gaarsiiyo.

ٱللَّهُ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ۚ وَعَلَى ٱللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ ٱلْمُؤْمِنُونَ ﴿١٣﴾

13. Alle, Allaah mooyee macbuud kaloo xaq lugu caabudo ma jiro isaga uunna ha tala saarteen mu'miniintu.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ إِنَّ مِنْ أَزْوَٰجِكُمْ وَأَوْلَٰدِكُمْ عَدُوًّا لَّكُمْ فَٱحْذَرُوهُمْ ۚ وَإِن تَعْفُوا۟ وَتَصْفَحُوا۟ وَتَغْفِرُوا۟ فَإِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٤﴾

14. Kuwa xaqa rumeeyow haweenkiinna iyo caruurtiinna waxaa ka mid ah kuwo col idiin ah ee ka digtoonaada, haddaadse iska cafidaan

saamaxdaanna Alle waa dambi dhaafe naxariiste ah.

15. Xoolihiinnu iyo caruurtiinnu waa uun fidno (ibtilo) Alle agtiisaase ajir weyn (ku sugan yahay).

إِنَّمَآ أَمۡوَٰلُكُمۡ وَأَوۡلَٰدُكُمۡ فِتۡنَةٞۚ وَٱللَّهُ عِندَهُۥٓ أَجۡرٌ عَظِيمٞ ١٥

Wax walba idanka Allaah yuu ku dhacaa, ruuxiise Alle rumeeya waxaa hanuuni oo toosi xasilina qalbigiisa, saas daraaddeed waa in Alle iyo Rasuulkiisa Muxamad ah (naxariis iyo nabad gelyo Alle korkiisa ha yeelee) la adeeco waana in Alle lagu xidhnaado lana tala saarto wax kastoo xaqa kaa leexin ama kaa shuqlinna laga digtoonaado, maxaa yeelay Alle ayaa wax loo dhawaada ah. Rasuulkuna wuxuu yidhi (ammaan iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): ilmuhu waa ay ku fulayeeyaan, kuna bakhaylsiiyaan, kuna walbahaariyaan. **[At-Taghaabun: 11-15].**

16. Alle ka dhawrsada intaad kartaan, maqla oo adeecana (weyneeya), waxna baxsada, ruuxii laga dhawro bakhaylnimada naftiisa waa liibaanay.

فَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ مَا ٱسۡتَطَعۡتُمۡ وَٱسۡمَعُواْ وَأَطِيعُواْ وَأَنفِقُواْ خَيۡرٗا لِّأَنفُسِكُمۡۗ وَمَن يُوقَ شُحَّ نَفۡسِهِۦ فَأُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلۡمُفۡلِحُونَ ١٦

17. Haddaad Alle amaah fiican amaahsataan (wax sadaqaysataan) Alle waa idiin laab laabi, dambigiinnana wuu dhaafi, Alle na waa kan la mahadiyo ee dusha san.

إِن تُقۡرِضُواْ ٱللَّهَ قَرۡضٗا حَسَنٗا يُضَٰعِفۡهُ لَكُمۡ وَيَغۡفِرۡ لَكُمۡۚ وَٱللَّهُ شَكُورٌ حَلِيمٌ ١٧

18. Waxa maqan iyo waxa joogaba Alle waa ogyahay waana adkaade falsan.

عَٰلِمُ ٱلۡغَيۡبِ وَٱلشَّهَٰدَةِ ٱلۡعَزِيزُ ٱلۡحَكِيمُ ١٨

Diinta islaamku ma aha wax lagu dhaqmi waayi oo adag, ee waa fududdahay, Alle na dadka wuxuu ka rabaa intay karaan uun inay ka yaabaan, waana in xaqa layska maqlaa layskuna adeecaa. Waxna la baxsadaa bakhaylnimada iyo xoola jacaylka daranna laga fogaadaa, si Allaha wax walba og inoogu abaal mariyo wanaag iyo khayr. Waxaa sugnaaday: haddaan wax idin faro la imaada waxaad ka kartaan, haddaan idinka reebana ka reebtoonaada. Waa saxiix. **[At-Taghaabun: 16-18].**

Suurat Adh-Dhalaaq

سُورَةُ ٱلطَّلَاقِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِيُّ إِذَا طَلَّقْتُمُ ٱلنِّسَآءَ فَطَلِّقُوهُنَّ لِعِدَّتِهِنَّ وَأَحْصُواْ ٱلْعِدَّةَۖ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ رَبَّكُمْۖ لَا تُخْرِجُوهُنَّ مِنۢ بُيُوتِهِنَّ وَلَا يَخْرُجْنَ إِلَّآ أَن يَأْتِينَ بِفَٰحِشَةٍ مُّبَيِّنَةٍۚ وَتِلْكَ حُدُودُ ٱللَّهِۚ وَمَن يَتَعَدَّ حُدُودَ ٱللَّهِ فَقَدْ ظَلَمَ نَفْسَهُۥۚ لَا تَدْرِى لَعَلَّ ٱللَّهَ يُحْدِثُ بَعْدَ ذَٰلِكَ أَمْرًا ﴿١﴾

1. Nabiyow haddaad haweenka furaysaan ciddada (billowgeeda) ku fura (daahir aan la taaban), ciddadana tiriya, Alle na ka dhawrsada, hana ka bixinnina guryahooda (ay joogeen marka la furayey) iyana yeyna ka bixin (yeyan ka tagin) inay xumaan cad la yimaadaan mooyee, taasi waa xudduddii Alle, ruuxii ka tallaaba xudduudda Alle na naftiisuu dulmiyey, ma ogidin, wuxuu Alle u dhaw yahay inuu ka dib xaal keeno, (jacayl, isku noqosho).

فَإِذَا بَلَغْنَ أَجَلَهُنَّ فَأَمْسِكُوهُنَّ بِمَعْرُوفٍ أَوْ فَارِقُوهُنَّ بِمَعْرُوفٍ وَأَشْهِدُواْ ذَوَىْ عَدْلٍ مِّنكُمْ وَأَقِيمُواْ ٱلشَّهَٰدَةَ لِلَّهِۚ ذَٰلِكُمْ يُوعَظُ بِهِۦ مَن كَانَ يُؤْمِنُ بِٱللَّهِ وَٱلْيَوْمِ ٱلْءَاخِرِۚ وَمَن يَتَّقِ ٱللَّهَ يَجْعَل لَّهُۥ مَخْرَجًا ﴿٢﴾

2. Markay ciddada dhammaadkeeda (ku dhawaadaan) si fiican u haysta, ama si fiican u faaruqa, laba qof oo caadiliina oo idin ka mid ahna marag uga dhiga, maraggana ha u guteen Alle dartiis, xaalkaasi waa wacdi ruuxii rumayn Alle iyo maalintii dambaysay «qiyaamada», ruuxii Alle ka dhawrsadana wuxuu u furi faraj.

وَيَرْزُقْهُ مِنْ حَيْثُ لَا يَحْتَسِبُ ۚ وَمَن يَتَوَكَّلْ عَلَى ٱللَّهِ فَهُوَ حَسْبُهُۥٓ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ بَٰلِغُ أَمْرِهِۦ ۚ قَدْ جَعَلَ ٱللَّهُ لِكُلِّ شَىْءٍ قَدْرًا ﴿٣﴾

3. Wuxuuna ka irsaaqi meel uusan ka filanayn, ruuxii Alle tala saartana waa ku filan yahay, Alle na amarkiisu waa fuli, (waxna kama fakado), wax walbana Alle wuxuu u yeelay waqti sugan (oo go'an).

Isfuriddu waa xaal diinta islaamku ayan jeclayn, maxaa yeelay waxaa ku dumi guri iyo qoys, hase yeeshee markay lagama maarmaan noqoto waa bannaan tahay, waase inaan lagu xadgudbin haweeynayda la furi, waqti fiicanna la furaa gurigana laga saarin intay ciddada ku jirto, waxaaba laga yaabaa inay isku noqdaan, waana in wanaag lagu wada noolaado, ama wanaag loo kala tago, Allana laga yaabo, taladana loo dhiibto illeen wax walba isagaa awoodee si uu faraj inoogu furo. Rasuulkuna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): ruuxii badiya dambi dhaaf warsi wuxuu uga yeelaa Alle murug walba faraj, cidhiidhi walbana ka bixid, wuxuuna ka arzaaqaa meeluusan ka filayn.Waxaa wariyey imaam Axmed. **[Adh-Dhalaaq: 1-3].**

وَٱلَّٰٓـِٔى يَئِسْنَ مِنَ ٱلْمَحِيضِ مِن نِّسَآئِكُمْ إِنِ ٱرْتَبْتُمْ فَعِدَّتُهُنَّ ثَلَٰثَةُ أَشْهُرٍ وَٱلَّٰٓـِٔى لَمْ يَحِضْنَ ۚ وَأُو۟لَٰتُ ٱلْأَحْمَالِ أَجَلُهُنَّ أَن يَضَعْنَ حَمْلَهُنَّ ۚ وَمَن يَتَّقِ ٱللَّهَ يَجْعَل لَّهُۥ مِنْ أَمْرِهِۦ يُسْرًا ﴿٤﴾

4. Haweenkiinna caadada ka quustay haddaad shakidaan ciddadoodu waa seddex bilood, kuwaan caada lahayn oo aanay weli ku dhicin waa sidaas oo kale, haweenka uurka leh ciddadoodu waa inay umulaan (dhalaan), ruuxii Alle ka dhawrsadana wuxuu u fududayn amarkiisa.

ذَٰلِكَ أَمْرُ ٱللَّهِ أَنزَلَهُۥٓ إِلَيْكُمْ ۚ وَمَن يَتَّقِ ٱللَّهَ يُكَفِّرْ عَنْهُ سَيِّـَٔاتِهِۦ وَيُعْظِمْ لَهُۥٓ أَجْرًا ﴿٥﴾

5. Kaasi waa amarkii Alle uu idiin soo dejiyey, ruuxii Alle ka dhawrsadana xumaantiisuu asturaa ajirkiisana wuu weyneeyaa.

أَسْكِنُوهُنَّ مِنْ حَيْثُ سَكَنتُم مِّن وُجْدِكُمْ وَلَا تُضَآرُّوهُنَّ لِتُضَيِّقُوا۟ عَلَيْهِنَّ ۚ وَإِن كُنَّ أُو۟لَٰتِ حَمْلٍ فَأَنفِقُوا۟ عَلَيْهِنَّ حَتَّىٰ يَضَعْنَ حَمْلَهُنَّ ۚ

6. Dejiya haweenkaas (ciddada ku jira) meelahaad daggan tihiin eed heli kartaan, hana dhibina si aad u ciriiridaan, hadday uur leeyihiinna nafaqeeya (masruufa) intay ka umulaan (ka dhalaan),

hadday ilmaha nuujiyaanna siiya ujuuro, wanaagna is fara, haddii laysku qabto nuujintana mid kale ayaa u nuujin.

فَإِنْ أَرْضَعْنَ لَكُمْ فَـَٔاتُوهُنَّ أُجُورَهُنَّ وَأْتَمِرُوا۟ بَيْنَكُم بِمَعْرُوفٍ ۖ وَإِن تَعَاسَرْتُمْ فَسَتُرْضِعُ لَهُۥٓ أُخْرَىٰ ﴿٦﴾

7. Ha ka nafaqeeyo (masruufo) midka awood xoola leh awooddiisa, kan wax yarna ha ka nafaqeeyo waxa Alle siiyey (ee uu karo), Alle na kuma mashaqeeyo naf wuxuusan siinnin, Alle na wuxuu yeeli cidhiidhi dabadiis fudayd (faraj).

لِيُنفِقْ ذُو سَعَةٍ مِّن سَعَتِهِۦ ۖ وَمَن قُدِرَ عَلَيْهِ رِزْقُهُۥ فَلْيُنفِقْ مِمَّآ ءَاتَىٰهُ ٱللَّهُ ۚ لَا يُكَلِّفُ ٱللَّهُ نَفْسًا إِلَّا مَآ ءَاتَىٰهَا ۚ سَيَجْعَلُ ٱللَّهُ بَعْدَ عُسْرٍ يُسْرًا ﴿٧﴾

Diintu waxay u timid inay dadka u caddayso arrimahooda, saas daraaddeed aayadahanu waxay ka warrami ciddada haweenka la furo, taas oo ah in haweenayda aan caada lahayn ay saddax bilood tirsan tan uurka lehna ay ciddadeedu ku eg tahay markay umusho, xaalkaasna waa arrin Alle soo dejiyey, tan kale waa in hooy loo yeelaa intay ciddada ku jirto, lana masruufo, ruux walbana awooddiisa uu ka masruufo, illeen Alle dadka kuma kallifo (mashaqeeyo) waxayna awoodine, ciddii Ilaahay ka yaabta kuna xidhnaatana Alle faraj yuu u furi xaalkiisana wuu fududayn. Waxaana soo sheegnay in cidhiidhi kasta Alle ka yeelo faraj sida imaam Axmed wariyey. **[Adh-Dhalaaq: 4-7].**

8. Maxay badan tahay magaalo caasiday amarka Alle iyo rusushiisa, markaas Alle xisaabay xisaab daran caddibaad adagna caddibay.

وَكَأَيِّن مِّن قَرْيَةٍ عَتَتْ عَنْ أَمْرِ رَبِّهَا وَرُسُلِهِۦ فَحَاسَبْنَٰهَا حِسَابًا شَدِيدًا وَعَذَّبْنَٰهَا عَذَابًا نُّكْرًا ﴿٨﴾

9. Oo dhadhamisay cidhibtii xaalkaa xumaantiisa, cidhibteediina ku dambaysay khasaare.

فَذَاقَتْ وَبَالَ أَمْرِهَا وَكَانَ عَٰقِبَةُ أَمْرِهَا خُسْرًا ﴿٩﴾

10. Alle wuxuu u darbay kuwaas caddibaad daran, ee Alle ka dhawrsada kuwa caqliga lahaw rumeeyeyowna, Ilaahay wuxuu idiin soo dejiyey quraane.

أَعَدَّ ٱللَّهُ لَهُمْ عَذَابًا شَدِيدًا ۖ فَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ يَٰٓأُو۟لِى ٱلْأَلْبَٰبِ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ۚ قَدْ أَنزَلَ ٱللَّهُ إِلَيْكُمْ ذِكْرًا ﴿١٠﴾

رَّسُولًا يَتْلُواْ عَلَيْكُمْ ءَايَٰتِ ٱللَّهِ
مُبَيِّنَٰتٍ لِّيُخْرِجَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ
ٱلصَّٰلِحَٰتِ مِنَ ٱلظُّلُمَٰتِ إِلَى ٱلنُّورِ ۚ
وَمَن يُؤْمِنۢ بِٱللَّهِ وَيَعْمَلْ صَٰلِحًا
يُدْخِلْهُ جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا
ٱلْأَنْهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدًا ۖ قَدْ أَحْسَنَ
ٱللَّهُ لَهُۥ رِزْقًا ﴿١١﴾

11. Rasuulna wuu idiin soo diray kaasoo idiin akhriya aayaadka Alle ee cad cad si uu kuwa mu'miniinta ah camal wanaagsanna falay uga bixiyo mugdiga nuurkana ugu bixiyo, ruuxii Alle rumeeya camal wanaagsanna fala wuxuu gelin jannooyin ay dureerayso dhexdeeda wabiyaal wayna ku waari waligood, Alle waa wanaajiyey kuwaas risqigooda.

ٱللَّهُ ٱلَّذِى خَلَقَ سَبْعَ سَمَٰوَٰتٍ وَمِنَ
ٱلْأَرْضِ مِثْلَهُنَّ ۖ يَتَنَزَّلُ ٱلْأَمْرُ بَيْنَهُنَّ
لِتَعْلَمُوٓاْ أَنَّ ٱللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ وَأَنَّ
ٱللَّهَ قَدْ أَحَاطَ بِكُلِّ شَىْءٍ عِلْمًا ﴿١٢﴾

12. Alle waa kan abuuray toddobo samo dhulkana kala mid dhigay, amarka Alle na wuxuu ku soo degaa dhexdooda, si aad u ogaataan in Alle wax walba karo wax walbana koobay.

Kibir iyo isla weynaan, madax adayg iyo xaqoo laga horjeedsado waxay cidhibtiisu noqotaa halaag iyo caddibaad daran, siday la kulmeen gaaladii saas falay ee horreeyey, hase yeeshee dadka xaqa rumeeyey ee caqliga leh waa inay aad ugu waana qaataan kuwaas, Alle na ka dhawrsadaan, illeen waa ka quraanka u soo dejiyey, Rasuulna u soo direy, mugdigana ka saaray, nuurna u bixiyee, si markaas wannag iyo janno loogu abaal mariyo, maxaa yeelay Alle waa kan awoodda leh, wax walbana abuuray wax walbana cilmigiisu koobay. Ruuxii dulmiya taako dhul ah waxaa madaxa loo galiyaa toddobada dhul. Waa saxiix. **[Adh-Dhalaaq: 8-12].**

Suurat At-Taxriim

سُورَةُ التَّحۡرِيمِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Nabiyow maxaad u xarrimi wax Alle kuu xalaaleeyey si aad u raalli geliso haweenkaaga, Alle waa dambi dhaafe naxariista ah.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِيُّ لِمَ تُحَرِّمُ مَآ أَحَلَّ ٱللَّهُ لَكَۖ تَبۡتَغِي مَرۡضَاتَ أَزۡوَٰجِكَۚ وَٱللَّهُ غَفُورٞ رَّحِيمٞ ١

2. Alle waa idiin caddeeyey waxa dhaartiinnu ku xalaaloobi, Alle na waa gargaarihiinna, waana wax walba oge falsan.

قَدۡ فَرَضَ ٱللَّهُ لَكُمۡ تَحِلَّةَ أَيۡمَٰنِكُمۡۚ وَٱللَّهُ مَوۡلَىٰكُمۡۖ وَهُوَ ٱلۡعَلِيمُ ٱلۡحَكِيمُ ٢

3. Xusuuso waqtigii Nabigu ku qarsaday haweenkiisa qaarkood hadal, markaas ay ka warrantay xaalkii, Alle na uu Nabiga u daahiriyey, markaas Nabigu uu ogeysiiyey qaarkiis (haweenaydii) qaarna uu ka dhaafay, marku uu warramay ay tiri yaa kuu sheegay xaalkan kuna yiri: waxaa ii warramay Allaha wax walba oge ah ee yaqaanna (waxa qarsoon).

وَإِذۡ أَسَرَّ ٱلنَّبِيُّ إِلَىٰ بَعۡضِ أَزۡوَٰجِهِۦ حَدِيثٗا فَلَمَّا نَبَّأَتۡ بِهِۦ وَأَظۡهَرَهُ ٱللَّهُ عَلَيۡهِ عَرَّفَ بَعۡضَهُۥ وَأَعۡرَضَ عَنۢ بَعۡضٖۖ فَلَمَّا نَبَّأَهَا بِهِۦ قَالَتۡ مَنۡ أَنۢبَأَكَ هَٰذَاۖ قَالَ نَبَّأَنِيَ ٱلۡعَلِيمُ ٱلۡخَبِيرُ ٣

4. Haddaad Alle u noqotaan, in kastoo qalbigiinnu iishay (Alle wuu idiin dhaafi) haddaadse isu kaalmaysataan Nabiga (dhibkiisa) waxaa u gargaari Alle, Jibriil iyo

إِن تَتُوبَآ إِلَى ٱللَّهِ فَقَدۡ صَغَتۡ قُلُوبُكُمَاۖ وَإِن تَظَٰهَرَا عَلَيۡهِ فَإِنَّ ٱللَّهَ هُوَ مَوۡلَىٰهُ وَجِبۡرِيلُ وَصَٰلِحُ ٱلۡمُؤۡمِنِينَۖ وَٱلۡمَلَٰٓئِكَةُ بَعۡدَ ذَٰلِكَ ظَهِيرٞ ٤

kuwa suuban ee mu'miniinta ah malaa'igta (kalana) markaas ka dib yey xoojin.

5. Wuxuu Alle u dhaw yahay in Nabigu hadduu idin furo (haweenka Nabiga qaarkood) idiinkaga beddelo kuwa idinka khayr roon oo ah muslimaad, mu'minaad ah, adeeca Alle, toobad keena, Alle caabuda, soomana, kuwa horay loo guursaday iyo kuwo aan hadda ka hor la guursanba leh.

عَسَىٰ رَبُّهُۥٓ إِن طَلَّقَكُنَّ أَن يُبْدِلَهُۥٓ
أَزْوَٰجًا خَيْرًا مِّنكُنَّ مُسْلِمَٰتٍ
مُّؤْمِنَٰتٍ قَٰنِتَٰتٍ تَٰٓئِبَٰتٍ عَٰبِدَٰتٍ
سَٰٓئِحَٰتٍ ثَيِّبَٰتٍ وَأَبْكَارًا ﴿٥﴾

Aayadahanu waxay ku soo degeen mar uu Nabigu (naxariis iyo nabadgelyo korkiis Alle ha yeelee) caano ama malab uu ka soo dhadhamiyey guri haweenaydiis, markaas uu kuwa kale qalbigoodu wax galay, Alle na isagaa wax xalaaleeya waxna xarrima, saas daraadeed yuu Nabiga ugu jeediyey arrintaas, tan kale waa inaan la isku kaalmaysan dhib iyo wax yeello ee laysu kaalmaystaa wanaag iyo sama fal, Alle na waa gargaaraha Rasuulkiisa iyo mu'miniinta. Masruuqna wuxuu yidhi: Nabiga waxaa la faray inuu dhaartii ka kafaaroguto. **[At-Taxriim: 1-5].**

6. Kuwa xaqa rumeeyow ka dhawra naftiinna iyo ehelkiinna naar lagu shido dad iyo dhagax ay kana (shaqeeyaan) malaa'ig adag oo daran oon Alle ku caasiyeyn wuxuu faro, falana wixii la amro.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ قُوٓا۟ أَنفُسَكُمْ
وَأَهْلِيكُمْ نَارًا وَقُودُهَا ٱلنَّاسُ وَٱلْحِجَارَةُ
عَلَيْهَا مَلَٰٓئِكَةٌ غِلَاظٌ شِدَادٌ لَّا يَعْصُونَ
ٱللَّهَ مَآ أَمَرَهُمْ وَيَفْعَلُونَ مَا يُؤْمَرُونَ ﴿٦﴾

7. Kuwa gaaloobow ha cudur daarannina maanta (qiyaamada) waxaa laydinka abaal marin uun waxaad camal fali jirteen.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ لَا تَعْتَذِرُوا۟ ٱلْيَوْمَ ۖ
إِنَّمَا تُجْزَوْنَ مَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٧﴾

8. Kuwa xaqa rumeeyow u toobad keena Alle toobad san, wuxuu Alle u dhaw yahay inuu asturo

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ تُوبُوٓا۟ إِلَى ٱللَّهِ تَوْبَةً
نَّصُوحًا عَسَىٰ رَبُّكُمْ أَن يُكَفِّرَ

عَنكُمْ سَيِّـَٔاتِكُمْ وَيُدْخِلَكُمْ
جَنَّـٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ يَوْمَ لَا
يُخْزِى ٱللَّهُ ٱلنَّبِىَّ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ مَعَهُۥ ۖ
نُورُهُمْ يَسْعَىٰ بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَبِأَيْمَـٰنِهِمْ
يَقُولُونَ رَبَّنَآ أَتْمِمْ لَنَا نُورَنَا وَٱغْفِرْ لَنَآ ۖ
إِنَّكَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿٨﴾

xumaantiinna, idin geliyana jannooyin ay dureerayso dhexdooda wabiyaal, maalinta uusan Alle hoojinayn Nabiga iyo kuwa la jooga, nuurkoodina wuxuu socon hortooda iyo midigtooda iyagoo dhihi Allow noo taam yeel nuurkannaga noona dambi dhaaf, adaa wax walba karee.

يَـٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِىُّ جَـٰهِدِ ٱلْكُفَّارَ وَٱلْمُنَـٰفِقِينَ
وَٱغْلُظْ عَلَيْهِمْ ۚ وَمَأْوَىٰهُمْ جَهَنَّمُ ۖ وَبِئْسَ
ٱلْمَصِيرُ ﴿٩﴾

9. Nabiyow la jihaad gaalada iyo munaafiqiinta kuna adkow, hoygooduna waa jahannamo, meel loo ahaadana iyadaa u xune.

Dadka xaqa rumeeyey waa inay ehelkooda khayrka faraan si ay uga nabad galaan naar dadka iyo dhagaxa lagu huriyo, malaa'ig daranna oo amraka Alle fulisana ay ka shaqayso, si ayna u noqonnin sida kuwa xaq diidka ah ee loo dhihi ha cudur daarannina maanta, waana in Alle toobad dhab ah loogu toobad keeno si uu wanaag iyo dambi dhaaf noogu abaal mariyo maalinta Nabiga iyo intii raacday Alle u sama fali illeen wax walba isagaa karee, gaalada iyo munaafiqiintana waa in lala jahaado si jidka toosan loo tusiyo. Salafki waxaa ka sugnatay in tawbadda nasuuxa ah (toosan) ay tahay in la qoomameeyo dambiga markuu kaa dhaco, ood markaas Alle dambidhaaf warsato, oo aad go'aansato inaadan u noqonnin. **[At-Taxriim: 6-9].**

ضَرَبَ ٱللَّهُ مَثَلًا لِّلَّذِينَ كَفَرُوا۟
ٱمْرَأَتَ نُوحٍ وَٱمْرَأَتَ لُوطٍ ۖ كَانَتَا
تَحْتَ عَبْدَيْنِ مِنْ عِبَادِنَا صَـٰلِحَيْنِ
فَخَانَتَاهُمَا فَلَمْ يُغْنِيَا عَنْهُمَا مِنَ
ٱللَّهِ شَيْـًٔا وَقِيلَ ٱدْخُلَا ٱلنَّارَ مَعَ
ٱلدَّٰخِلِينَ ﴿١٠﴾

10. Alle wuxuu tusaale uga dhigay kuwa gaaloobay haweenaydii Nabi Nuux iyo Nabi Luudh, waxaa qabay laba addoon oo Alle oo suusuubban, markaasay khiyaameen Nabiyadaa (gogol dhaafna ma ahan) waxbana ugama ayan tarin Alle agtiis, waxaana loo dhihi labadaas haweenay la gala naarta kuwa gelaya.

وَضَرَبَ ٱللَّهُ مَثَلًا لِّلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱمۡرَأَتَ فِرۡعَوۡنَ إِذۡ قَالَتۡ رَبِّ ٱبۡنِ لِي عِندَكَ بَيۡتٗا فِي ٱلۡجَنَّةِ وَنَجِّنِي مِن فِرۡعَوۡنَ وَعَمَلِهِۦ وَنَجِّنِي مِنَ ٱلۡقَوۡمِ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿١١﴾

11. Waxaa kale oo Alle tusaale uga dhigay kuwa rumeeyey haweenaydii Fircoon markay tidhi Rabbiyow guri agtaada iiga dhis jannada dhexdeeda, igana nabad geli Fircoon iyo camalkiisa, igana nabad geli dadkaas daalimiinta ah.

وَمَرۡيَمَ ٱبۡنَتَ عِمۡرَٰنَ ٱلَّتِيٓ أَحۡصَنَتۡ فَرۡجَهَا فَنَفَخۡنَا فِيهِ مِن رُّوحِنَا وَصَدَّقَتۡ بِكَلِمَٰتِ رَبِّهَا وَكُتُبِهِۦ وَكَانَتۡ مِنَ ٱلۡقَٰنِتِينَ ﴿١٢﴾

12. (Waxaa kale oo Alle tusaale uga dhigay kuwa rumeeyey) Maryama binti Cimraan ee ah tii isdhawrtay, markaas malagga (Jibriil ah) (canbuurku meesha kore ee uu ka furan yahay) ka afuufay, rumaysayna sharciga Alle iyo kutubtiisaba, kana mid noqotay kuwa Alle adeeca.

Ruux xumaanlaw ah wax uma tarto la nooli dad fiican hadduusan wax qaadanaynin, sida haweenkii Nabi Nuux iyo Nabi Luudh iyo wixii la mid ahaa. Sidoo kale ruuxii wanaagsan xumaan qof kale wax ma yeesho hadduusan ka raalli ahayn sida haweenaydii Fircoon, Maryama bintu Cimraan oo Nabi Ciise hooyadiis ahayd xaalkeeduna la yaabuu lahaa waxayse ku tusin in Allaha bini Aadamka abuuray uu siduu rabo wax u falo saasna waa in la rumeeyo. Nabiguna wuuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): waxaa kaamil noqday ragga wax badan, haweense waxaa ka kaamil noqday Aasiyadii Fircoon, Maryama Bintu Cimraan, fadliga caa'isho ee haweenkana waa sida thariidka iyo cunnada kale. (Bukhaari iyo Muslim). **[At-Taxriim: 10-12].**

Suurat Al-Mulk

سُورَةُ ٱلْمُلْكِ

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

تَبَٰرَكَ ٱلَّذِى بِيَدِهِ ٱلْمُلْكُ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿١﴾

1. Waxaa barako badnaaday (oo weynaaday) Allaha xukunku iyo hanashada caalamku gacantiisa ku jiro ee wax walbana kara.

ٱلَّذِى خَلَقَ ٱلْمَوْتَ وَٱلْحَيَوٰةَ لِيَبْلُوَكُمْ أَيُّكُمْ أَحْسَنُ عَمَلًا ۚ وَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْغَفُورُ ﴿٢﴾

2. Allaha abuuray geeri iyo nololba, si uu dadow idiin imtixaamo kiinna camal fiican, Alle na waa adkaade dambidhaafe ah.

ٱلَّذِى خَلَقَ سَبْعَ سَمَٰوَٰتٍ طِبَاقًا ۖ مَّا تَرَىٰ فِى خَلْقِ ٱلرَّحْمَٰنِ مِن تَفَٰوُتٍ ۖ فَٱرْجِعِ ٱلْبَصَرَ هَلْ تَرَىٰ مِن فُطُورٍ ﴿٣﴾

3. Alle waa midka abuuray toddobo samo oo isdul saaran kuna arki maysid abuurka Allaha Raxmaanka ah kala tagsani, bal daymada celi inaad aragto wax dillaac ah.

ثُمَّ ٱرْجِعِ ٱلْبَصَرَ كَرَّتَيْنِ يَنقَلِبْ إِلَيْكَ ٱلْبَصَرُ خَاسِئًا وَهُوَ حَسِيرٌ ﴿٤﴾

4. Haddana celi daymada waxaa kugu soo noqon aragga oo dhibban daallanna.

وَلَقَدْ زَيَّنَّا ٱلسَّمَآءَ ٱلدُّنْيَا بِمَصَٰبِيحَ وَجَعَلْنَٰهَا رُجُومًا لِّلشَّيَٰطِينِ ۖ وَأَعْتَدْنَا لَهُمْ عَذَابَ ٱلسَّعِيرِ ﴿٥﴾

5. Alle wuxuu ku qurxiyey samada dhow nalal (xiddigaha) wuxuuna ka dhigay xiddigahaas kuwo lagu gano shayaadiinta, wuxuuna Alle u diyaariyay kuwaas naarta saciiro.

Alle khayrkiisu waa badan yahay wax walbana awooddiisay ku hoos jiraan wax walbana wuu karaa, dadkana waxaa loo abuuray in la imtixaano kooda camal aakhiro iyo kan aduunkaba wanaajiya, Alle abuuriddiisa uu cirka abuurayna wax dhaliil ah loo heli maayo sida khalqigiisa kalaba, xiddigahana Alle ayaa abuuray iyagoo nalal u ah cirka, shayaadiintana lagu eryo, Allaha awooddaas leh waa in la caabudo, jidka uu farayna lagu socdaa. Rasuulkuna waxaa laga weriyay inuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) Alle wuxuu ku dulleeyey banii aadmaka geeri, wuxuuna ka yeelay adduunka guri nolol iyo geeri, kana yeelay aakhirana guri abaalmarin iyo waarid. Waxaa wariyey Ibnu abii Xaatim. **[Al-Mulk: 1-5].**

وَلِلَّذِينَ كَفَرُواْ بِرَبِّهِمْ عَذَابُ جَهَنَّمَۖ وَبِئْسَ ٱلْمَصِيرُ ٦

6. Kuwa ka gaaloobay Rabbigood waxaa u sugnaaday caddibaadda jahannamo, meel loo ahaadana iyadaa u xun.

إِذَآ أُلْقُواْ فِيهَا سَمِعُواْ لَهَا شَهِيقًا وَهِيَ تَفُورُ ٧

7. Marka gaalada lagu tuuro naarta waxay ka maqli cod xun oo daran iyadoo karaysa.

تَكَادُ تَمَيَّزُ مِنَ ٱلْغَيْظِۖ كُلَّمَآ أُلْقِيَ فِيهَا فَوْجٌ سَأَلَهُمْ خَزَنَتُهَآ أَلَمْ يَأْتِكُمْ نَذِيرٌ ٨

8. Waxay u dhawdahay inay cadha daraaddeed la kala dillaacdo, marka koox (gaala ah) lagu ridaba waxaa warsada malaa'igta naarta ka shaqeysa iyagoo ku dhihi miyuusan idiin imaannin wax idiin diga.

قَالُواْ بَلَىٰ قَدْ جَآءَنَا نَذِيرٌ فَكَذَّبْنَا وَقُلْنَا مَا نَزَّلَ ٱللَّهُ مِن شَيْءٍ إِنْ أَنتُمْ إِلَّا فِي ضَلَٰلٍ كَبِيرٍ ٩

9. Waxayna ugu jawaabi waa noo yimid wax noo diga waanse beeninnay, annagoo leh ma soo dejinnin Alle waxba, idinkuna waxaad ku sugan tihiin baadi weyn.

وَقَالُواْ لَوْ كُنَّا نَسْمَعُ أَوْ نَعْقِلُ مَا كُنَّا فِيٓ أَصْحَٰبِ ٱلسَّعِيرِ ١٠

10. Gaaladii waxay dhaheen haddaan wax maqlaynno ama aan wax kasayno naarta saciiro ehelkeeda ma aannaan noqonneen.

فَٱعۡتَرَفُواْ بِذَنۢبِهِمۡ فَسُحۡقٗا لِّأَصۡحَٰبِ ٱلسَّعِيرِ ﴿١١﴾

11. Waxay qirteen (gaaladu) dambigoodii waxaana u sugnaatay fogaansho naarta saciiro ehelkeeda.

Xaq diidayaashu waxay geli naar daran oo karaysay qaylana leh, malaa'igtuna si canaan iyo guulguul ah yey u warsataa in rasuul u diga loo soo diray iyo in kale, iyaguna way qirtaan in rasuul loo soo diray ayse beeniyeen xaqiina diideen, wayna calaacaleen iyagoo leh haddaan wax kasayno naar ma aannan galleen, saas daraaddeed waa in Alle laga yaabo laguna waano qaato arrintaas. Waxaa sugnaaday: dadka lama halaago intay naftoodu ka garaabaan. **[Al-Mulk: 6-11].**

إِنَّ ٱلَّذِينَ يَخۡشَوۡنَ رَبَّهُم بِٱلۡغَيۡبِ لَهُم مَّغۡفِرَةٞ وَأَجۡرٞ كَبِيرٞ ﴿١٢﴾

12. Kuwa Alle ka yaaba iyagoon la arkaynin (Alle mooyee) waxaa u sugnaaday dambi dhaaf iyo ajri weyn.

وَأَسِرُّواْ قَوۡلَكُمۡ أَوِ ٱجۡهَرُواْ بِهِۦٓۖ إِنَّهُۥ عَلِيمُۢ بِذَاتِ ٱلصُّدُورِ ﴿١٣﴾

13. Ama hadalka hoos u dhiga dadow ama kor u qaada Alle waa ogyahay waxa laabta ku jira.

أَلَا يَعۡلَمُ مَنۡ خَلَقَ وَهُوَ ٱللَّطِيفُ ٱلۡخَبِيرُ ﴿١٤﴾

14. Ma waxaan wax ogeyn Allaha wax walba abuuray ee wax walba daalacan.

هُوَ ٱلَّذِي جَعَلَ لَكُمُ ٱلۡأَرۡضَ ذَلُولٗا فَٱمۡشُواْ فِي مَنَاكِبِهَا وَكُلُواْ مِن رِّزۡقِهِۦۖ وَإِلَيۡهِ ٱلنُّشُورُ ﴿١٥﴾

15. Alle waa kan dhulka ka dhigay mid laylyan, ee ku socda waddooyinkiisa kana cuna quudkiisa Alle ayaana dadka loo soo kulmin (qiyaamada).

ءَأَمِنتُم مَّن فِي ٱلسَّمَآءِ أَن يَخۡسِفَ بِكُمُ ٱلۡأَرۡضَ فَإِذَا هِيَ تَمُورُ ﴿١٦﴾

16. Miyaad ka aamin noqoteen Allaha sare inuu dhulka idin la gooyo, ayna idinla dhaqdhaqaaqdo.

أَمۡ أَمِنتُم مَّن فِي ٱلسَّمَآءِ أَن يُرۡسِلَ عَلَيۡكُمۡ حَاصِبٗاۖ فَسَتَعۡلَمُونَ كَيۡفَ نَذِيرِ ﴿١٧﴾

17. Miyaadse ka aamin noqoteen Allaha sare inuu dhagaxyo naar ah idinku soo daadiyo, waad ogaan doontaan digniinta Alle cidhibteeda.

وَلَقَدْ كَذَّبَ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ فَكَيْفَ كَانَ نَكِيرِ ﴿١٨﴾

18. Waxaa Alle beeniyey gaaladii (reer makaad) ka horreeyey, sidayse ahayd ciqaabti Alle.

Dadka Alle dhabnima u rumeeyey way caabudi kana dhoowrsan xumaanta iyagoon arkaynin ama dad ha la joogeen ama keli ha ahaadeene. Alle na wuxuu ku abaal marin dambi dhaafkiisa, Allaha wax walba og ee dhulka laylyey ee qiyaamada loo soo kulmi miyaa ciqaabtiisa cidna ka aamin noqon kartaa, dadka xun iyo gaaladaba waxa u caada ah inay Alle beeniyaan, waxaase ku dhici ciqaabta Alle, waxaana ka nabad geli ruuxii waddada Alle qaada. Toddobada Alle hadheeyo maalinta qiyaame waxaa ka mid ah kuwa Alle ka yaaba iyo kuwa xusuusta iyagoo kali ah indhahooduna ilmeeyaan. (Waa saxiix). **[Al-Mulk: 12-18].**

أَوَلَمْ يَرَوْا۟ إِلَى ٱلطَّيْرِ فَوْقَهُمْ صَٰٓفَّٰتٍ وَيَقْبِضْنَ ۚ مَا يُمْسِكُهُنَّ إِلَّا ٱلرَّحْمَٰنُ ۚ إِنَّهُۥ بِكُلِّ شَىْءٍۭ بَصِيرٌ ﴿١٩﴾

19. Miyeyna dadku arkaynin shimbiraha korkooda ah marna baalka fidin marna laabi wax haya oon Allaha Raxmaan ahaynna uusan jirin, Alle na wax walba wuu arkaa.

أَمَّنْ هَٰذَا ٱلَّذِى هُوَ جُندٌ لَّكُمْ يَنصُرُكُم مِّن دُونِ ٱلرَّحْمَٰنِ ۚ إِنِ ٱلْكَٰفِرُونَ إِلَّا فِى غُرُورٍ ﴿٢٠﴾

20. Waa kuma gargaaraha Allaha Raxmaan ah ka soo hadhay ee u gaargaari gaalada, gaaladu waxay ku sugan yihiin kadsoomid.

أَمَّنْ هَٰذَا ٱلَّذِى يَرْزُقُكُمْ إِنْ أَمْسَكَ رِزْقَهُۥ ۚ بَل لَّجُّوا۟ فِى عُتُوٍّ وَنُفُورٍ ﴿٢١﴾

21. Waa kuma kan wax quudiya haddii Alle haysto risqigiisa, gaaladu waxay ku madax adaygeen isla weyni iyo xaq diidnimo.

أَفَمَن يَمْشِى مُكِبًّا عَلَىٰ وَجْهِهِۦٓ أَهْدَىٰٓ أَمَّن يَمْشِى سَوِيًّا عَلَىٰ صِرَٰطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿٢٢﴾

22. Midkee wanaagsan ruux wajiga ku socda iyo mid si toosan oo siman waddda toosan ugu socda.

قُلْ هُوَ ٱلَّذِىٓ أَنشَأَكُمْ وَجَعَلَ لَكُمُ ٱلسَّمْعَ وَٱلْأَبْصَٰرَ وَٱلْأَفْـِٔدَةَ ۖ قَلِيلًا مَّا تَشْكُرُونَ ﴿٢٣﴾

23. Dheh Nabiyow Alle waa midka dadkow idin ahaysiiyey, maqal iyo arag iyo caqlina idiin yeelay, wax yar baadse Alle ku shukridaan.

قُلْ هُوَ ٱلَّذِى ذَرَأَكُمْ فِى ٱلْأَرْضِ وَإِلَيْهِ تُحْشَرُونَ ﴿٢٤﴾

24. Dheh Alle waa midka dadkow dhulka idinku beeray isagaana (qiyaamada) loo soo kulmin doonaa dadka.

Alle awooddiisa yaa wax walba ka sarreysa, gargaare, quudiye, abuure iyo wax walba ogaadana waa isaga, maalinta qiyaamana waa la hor imaan, ruux walbana wuxuu ku abaal marin camalkiisa. Nabiguna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) markii la warsaday sidee dadka loogu soo kulmin wajigooda: Allaha ku socodsiiyey lugahooda wuxuu karaa inuu ku socodsiiyo wajigooda. **[Al-Mulk: 19-24].**

وَيَقُولُونَ مَتَىٰ هَٰذَا ٱلْوَعْدُ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٢٥﴾

25. Waxay dhihi gaaladu waa goorma waqtiguu dhici waxa naloogu gooddin haddaad run sheegaysaan.

قُلْ إِنَّمَا ٱلْعِلْمُ عِندَ ٱللَّهِ وَإِنَّمَآ أَنَا۠ نَذِيرٌ مُّبِينٌ ﴿٢٦﴾

26. Dheh Alle ayaa og goortaas, waxaanse ahay anigu u dige cad (muuqda).

فَلَمَّا رَأَوْهُ زُلْفَةً سِيٓـَٔتْ وُجُوهُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَقِيلَ هَٰذَا ٱلَّذِى كُنتُم بِهِۦ تَدَّعُونَ ﴿٢٧﴾

27. Markaysa gaaladu naarta oo u dhow arkaan waxaa xumaan oo doorsoomi wajiga gaalada, waxaana lagu dhihi waa kan cadibaaddii aad doonayseen (dedejisanayseen).

قُلْ أَرَءَيْتُمْ إِنْ أَهْلَكَنِىَ ٱللَّهُ وَمَن مَّعِىَ أَوْ رَحِمَنَا فَمَن يُجِيرُ ٱلْكَٰفِرِينَ مِنْ عَذَابٍ أَلِيمٍ ﴿٢٨﴾

28. Dheh balse ka warrama haddii Alle aniga (Nabiga) iyo inta ila jirta uu halligo ama u naxariisto yaa gaalo ka korin caddibaad daran.

قُلْ هُوَ ٱلرَّحْمَٰنُ ءَامَنَّا بِهِۦ وَعَلَيْهِ تَوَكَّلْنَا ۖ فَسَتَعْلَمُونَ مَنْ هُوَ فِى ضَلَٰلٍ مُّبِينٍ ﴿٢٩﴾

29. Dheh Alle waa Raxmaan waana rumaynay, waana tala saarannay, waadse ogaan doontaan (gaalooy) cidda baadi cad ku sugan.

30. Dheh balse warrama hadday biyuhu dhulka ku gudhaan yaa idin siin biya durduri (ma jiro Alle waxaan ahayn).

قُلْ أَرَءَيْتُمْ إِنْ أَصْبَحَ مَآؤُكُمْ غَوْرًا
فَمَن يَأْتِيكُم بِمَآءٍ مَّعِينٍ ﴿٣٠﴾

Dadka xun had iyo jeer aad uma fikiraan saas daraaddeed waxay ku hadlaan gafaf iyo xujooyin qiimo daran, Nabiguna (naxariis iyo nabad gelyo Alle korkiisa ha yeelee) shaqadiisu waa inuu dadka wanaag ugu yeedho, xumaantana uga digo, wax walbase Alle ayaa kara oo og, markase uu gaalada haleelo caddibaad daran yey ogaan doonaan dhabta iyo xaqiiqada, gargaarka kuwa xaqa rumeeyey iyo imtixaankoodaba Alle ayaa leh, gaalana caddibaad kama baajinayso, ee waa in Allaha Raxmaan ee awoodda leh ee dadka quudiya isaga uun la caabudaa lagana yaabaa. **[Al-Mulk: 25-30].**

Suurat Al-Qalam

سُورَةُ ٱلْقَلَمِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Alle wuxuu ku dhaartay qalinka iyo waxa malaa'igtu qorayso (camalka dadka).

نٓ وَٱلْقَلَمِ وَمَا يَسْطُرُونَ ﴿١﴾

2. Ee Nabiyow nicmada Alle darteed lama waallid.

مَآ أَنتَ بِنِعْمَةِ رَبِّكَ بِمَجْنُونٍ ﴿٢﴾

3. Waxaana kuu sugnaaday ajri aan go'ayn.

وَإِنَّ لَكَ لَأَجْرًا غَيْرَ مَمْنُونٍ ﴿٣﴾

4. Waxaana kuu sugnaaday dabeeco (fiican) oo weyn.

وَإِنَّكَ لَعَلَىٰ خُلُقٍ عَظِيمٍ ﴿٤﴾

5. Waad arki doontaa Nabiyow gaaladuna way arki doonaan.

فَسَتُبْصِرُ وَيُبْصِرُونَ ﴿٥﴾

6. Kiinna waalan (ama la caddibo).

بِأَييِّكُمُ ٱلْمَفْتُونُ ﴿٦﴾

7. Rabbigaa waa ogyahay cidda ka dhunta jidkiisa, waana ogyahay cidda hanuunsan.

إِنَّ رَبَّكَ هُوَ أَعْلَمُ بِمَن ضَلَّ عَن سَبِيلِهِۦ وَهُوَ أَعْلَمُ بِٱلْمُهْتَدِينَ ﴿٧﴾

8. Ee Nabiyow ha maqlin xaq beeniyayaasha (warkooda).

فَلَا تُطِعِ ٱلْمُكَذِّبِينَ ﴿٨﴾

9. Waxay jecel yihiin inaad u iilato (oo aad ku waafaqdo waxyaabaha qaar) iyana kuu soo iishaan.

وَدُّوا۟ لَوْ تُدْهِنُ فَيُدْهِنُونَ ﴿٩﴾

10. Ha maqlin dhaar badane dhammaantiis oo dullaysan.

وَلَا تُطِعْ كُلَّ حَلَّافٍ مَّهِينٍ ﴿١٠﴾

11. Oo xanlow ah, isku diraa ah.
هَمَّازٍ مَّشَّآءٍۭ بِنَمِيمٍ ﴿١١﴾

12. Khayrka iyo xoolahana reeba, gardarrow iyo dambiile ah.
مَّنَّاعٍ لِّلْخَيْرِ مُعْتَدٍ أَثِيمٍ ﴿١٢﴾

13. Xumaantana ku madax adag isku dhejisna ah (xumaanlow ah).
عُتُلٍّۭ بَعْدَ ذَٰلِكَ زَنِيمٍ ﴿١٣﴾

14. Inuu xoolo iyo wiilal uu leeyahay darteed (yuu saas u falay).
أَن كَانَ ذَا مَالٍ وَبَنِينَ ﴿١٤﴾

15. Marka quraankannaga lagu akhriyana wuxuu dhahaa waa dadkii hore warkoodii.
إِذَا تُتْلَىٰ عَلَيْهِ ءَايَٰتُنَا قَالَ أَسَٰطِيرُ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿١٥﴾

16. Wuxuuse Alle ka calaamayn sanqaroorka.
سَنَسِمُهُۥ عَلَى ٱلْخُرْطُومِ ﴿١٦﴾

Alle Nabiga wuxuu ugu nicmeeyey ajri weligii socda, iyo akhlaaq wanaagsan, dadkuna iskuma qasna Alle agtiisa, cid walba mid toosan iyo mid dhunsan, weligaana ha maqlin warka ruuxa xanlowga ah, beenlowga ah, isku diraaga ah, xumaan jecaylka ah. Nabigana (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) waxay ahayd dabeecadiisu quraanka siday Caa'isha sheegtay. Wuxuuna yidhi: jannada ma galo namiimiye. **[Al-Qalam: 1-16].**

17. Alle wuu imtixaanay gaaladii (reer makaad) sidii loo imtixaanay kuwii beerta markay ku dhaarteen inay aroortii goostaan.
إِنَّا بَلَوْنَٰهُمْ كَمَا بَلَوْنَآ أَصْحَٰبَ ٱلْجَنَّةِ إِذْ أَقْسَمُوا۟ لَيَصْرِمُنَّهَا مُصْبِحِينَ ﴿١٧﴾

18. Iyagoon dhihin haddii Alle idmo.
وَلَا يَسْتَثْنُونَ ﴿١٨﴾

19. Waxaase beertii xagga Alle uga yimid amar iyagoo hurda.
فَطَافَ عَلَيْهَا طَآئِفٌ مِّن رَّبِّكَ وَهُمْ نَآئِمُونَ ﴿١٩﴾

20. Waxayna noqotay wax la shafay oo kale.
فَأَصْبَحَتْ كَٱلصَّرِيمِ ﴿٢٠﴾

21. Wayna isu dhawaaqeen subaxdii.
فَتَنَادَوْا۟ مُصْبِحِينَ ﴿٢١﴾

22. Iyagoo leh kallaha oo beerta goosta.

أَنِ ٱغۡدُواْ عَلَىٰ حَرۡثِكُمۡ إِن كُنتُمۡ صَٰرِمِينَ ﴿٢٢﴾

23. Wayna tageen iyagoo codka hoos u dhigi.

فَٱنطَلَقُواْ وَهُمۡ يَتَخَٰفَتُونَ ﴿٢٣﴾

24. Inaan beerta maanta miskiin soo gelin.

أَن لَّا يَدۡخُلَنَّهَا ٱلۡيَوۡمَ عَلَيۡكُم مِّسۡكِينٞ ﴿٢٤﴾

25. Wayna kallaheen iyagoo diiddan (in miskiin u soo galo).

وَغَدَوۡاْ عَلَىٰ حَرۡدٖ قَٰدِرِينَ ﴿٢٥﴾

26. Markii ay arkeen beertii siday tahay yey isu dhaheen waan soo dhunnay.

فَلَمَّا رَأَوۡهَا قَالُوٓاْ إِنَّا لَضَآلُّونَ ﴿٢٦﴾

27. Haddana way isgarteen waxayna dhaheen ma ehee waa la ina hoojiyey.

بَلۡ نَحۡنُ مَحۡرُومُونَ ﴿٢٧﴾

28. Markaas kii u fiicnaa yiri: miyaana idin dhihin war Alle weyneeya.

قَالَ أَوۡسَطُهُمۡ أَلَمۡ أَقُل لَّكُمۡ لَوۡلَا تُسَبِّحُونَ ﴿٢٨﴾

29. Markaasay dheheen Alle ayaa weyn, waan xad gudubnay.

قَالُواْ سُبۡحَٰنَ رَبِّنَآ إِنَّا كُنَّا ظَٰلِمِينَ ﴿٢٩﴾

30. Markaasaa qaarba qaar ku jeedsaday iyagoo is dagaali.

فَأَقۡبَلَ بَعۡضُهُمۡ عَلَىٰ بَعۡضٖ يَتَلَٰوَمُونَ ﴿٣٠﴾

31. Waxayna dheheen magacaanna ba'ye waan xad gudubnay.

قَالُواْ يَٰوَيۡلَنَآ إِنَّا كُنَّا طَٰغِينَ ﴿٣١﴾

32. Alle wuxuu u dhow yahay inuu noogu beddelo mid ka fiican, isagaan khayr ka rajaynaynaa eh.

عَسَىٰ رَبُّنَآ أَن يُبۡدِلَنَا خَيۡرٗا مِّنۡهَآ إِنَّآ إِلَىٰ رَبِّنَا رَٰغِبُونَ ﴿٣٢﴾

33. Caddibaaddu waa saas, caddibaadda aakharaase ka weyn haddii ay wax og yihiin.

كَذَٰلِكَ ٱلۡعَذَابُۖ وَلَعَذَابُ ٱلۡأٓخِرَةِ أَكۡبَرُۚ لَوۡ كَانُواْ يَعۡلَمُونَ ﴿٣٣﴾

Adduunku waa imtixaan, waase in ruuxu ka faa'iidaysto imtixaanka oo isa saxaa hadduu qalloocsan yahay, sidaa reer Maka ahaayeen iyo wixii la mid ah, qisadanna waa qiso weyn oo xikmo iyo waano ku jirto, saas daraaddeed waa inaan ruuxna isla weynaannin, wanaag inuusan samayn ku dhaarannin, masaakiinta iyo dadka tabarta daranna gooynin, haddii kale ha sugo caddibaadda adduunka iyo mid aakhiraba. **[Al-Qalam: 17-33].**

إِنَّ لِلْمُتَّقِينَ عِندَ رَبِّهِمْ جَنَّٰتِ ٱلنَّعِيمِ ﴿٣٤﴾

34. Kuwa Alle ka dhowrsada waxay Rabbigood agtiisa ku leeyihiin «jannada naciima».

أَفَنَجْعَلُ ٱلْمُسْلِمِينَ كَٱلْمُجْرِمِينَ ﴿٣٥﴾

35. Ma muslimiinta yaannu kala mid dhigaynaa dambiilayaasha.

مَا لَكُمْ كَيْفَ تَحْكُمُونَ ﴿٣٦﴾

36. Seed u dhihi kartaan saas.

أَمْ لَكُمْ كِتَٰبٌ فِيهِ تَدْرُسُونَ ﴿٣٧﴾

37. Mise gaalooy waxaa idiin sugnaaday kitaab aad akhrisataan.

إِنَّ لَكُمْ فِيهِ لَمَا تَخَيَّرُونَ ﴿٣٨﴾

38. Oo waxaad doontaanba aad ka helaysaan.

أَمْ لَكُمْ أَيْمَٰنٌ عَلَيْنَا بَٰلِغَةٌ إِلَىٰ يَوْمِ ٱلْقِيَٰمَةِ إِنَّ لَكُمْ لَمَا تَحْكُمُونَ ﴿٣٩﴾

39. Mise ballan adag yaad naga qaaddeen tan iyo maalinta qiyaame oo waxaad xukuntaan aad helaysaan.

سَلْهُمْ أَيُّهُم بِذَٰلِكَ زَعِيمٌ ﴿٤٠﴾

40. Weydii (Nabiyow) gaalada cidda damiinka ugu ah xaalkaas.

أَمْ لَهُمْ شُرَكَآءُ فَلْيَأْتُوا۟ بِشُرَكَآئِهِمْ إِن كَانُوا۟ صَٰدِقِينَ ﴿٤١﴾

41. Mise dad la wadaaga arrintaas oo u kaalmeeya yey leeyihiin, ha keeneen kuwaas hadday run sheegi.

يَوْمَ يُكْشَفُ عَن سَاقٍ وَيُدْعَوْنَ إِلَى ٱلسُّجُودِ فَلَا يَسْتَطِيعُونَ ﴿٤٢﴾

42. Maalinta dhudhunka la faydi doono gaaladana loogu yeedhi doono inay sujuudaan ma karayaan sujuud.

خَٰشِعَةً أَبۡصَٰرُهُمۡ تَرۡهَقُهُمۡ ذِلَّةٞۖ وَقَدۡ كَانُواْ يُدۡعَوۡنَ إِلَى ٱلسُّجُودِ وَهُمۡ سَٰلِمُونَ ﴿٤٣﴾

43. Indhaha gaaladu maalintaas waa dullaysan yihiin waxaana ka muuqda walbahaar iyo qoomammo, waxayna ahaayeen (adduunka) kuwa loogu yeeray sujuud iyagoo nabad qaba.

Alle cid walba wuu abaal mariyaa, muslim iyo gaal, wanaag fale iyo xumaan falana isku mid kama dhigo, gaalana wax xuja ah uma haysato xumaantooda, maalinta qiyaamana dadka xun Alle wuu imtixaani wuxuuna fari inay sujuudaan, hase yeeshee ma karayaan, maxaa yeelay adduunkii yeyan sujuudi jirin iyagoo nabad qaba, dulli iyo qoomammo yaana ka muuqan maalintaas. **[Al-Qalam: 34-43].**

فَذَرۡنِي وَمَن يُكَذِّبُ بِهَٰذَا ٱلۡحَدِيثِۖ سَنَسۡتَدۡرِجُهُم مِّنۡ حَيۡثُ لَا يَعۡلَمُونَ ﴿٤٤﴾

44. Isu kaanna daa aniga iyo kuwa beeniyey quraanka waana sasabi iyagoon ogeyn.

وَأُمۡلِي لَهُمۡۚ إِنَّ كَيۡدِي مَتِينٌ ﴿٤٥﴾

45. Waana sugi tan iyo muddo, dhagarta Alle na waa xoog badan tahay (kan wax dhagra haddii la dhagro waa dhagar booskeedi dhacday, waana ammaan).

أَمۡ تَسۡـَٔلُهُمۡ أَجۡرٗا فَهُم مِّن مَّغۡرَمٖ مُّثۡقَلُونَ ﴿٤٦﴾

46. Nabiyow ma waxaad weydiisatay gaalada ujuuro oo markaas cusleeyey.

أَمۡ عِندَهُمُ ٱلۡغَيۡبُ فَهُمۡ يَكۡتُبُونَ ﴿٤٧﴾

47. Mise waxa maqan yaa aktooda yaal ooy wax ka qori.

فَٱصۡبِرۡ لِحُكۡمِ رَبِّكَ وَلَا تَكُن كَصَاحِبِ ٱلۡحُوتِ إِذۡ نَادَىٰ وَهُوَ مَكۡظُومٞ ﴿٤٨﴾

48. Ku samir xukunka Alle hana noqonnin sidii saaxiibkii xuudka (mallayga ee ahaa Nebi Yuunus) markuu u dhawaaqay Allehiis isaga oo walbahaarsan.

لَّوۡلَآ أَن تَدَارَكَهُۥ نِعۡمَةٞ مِّن رَّبِّهِۦ لَنُبِذَ بِٱلۡعَرَآءِ وَهُوَ مَذۡمُومٞ ﴿٤٩﴾

49. Haddaan naxariista Alle haleelin waxaa lagu tuuri lahaa cidlo (bannaan) isagoo la dagaalay.

فَٱجۡتَبَٰهُ رَبُّهُۥ فَجَعَلَهُۥ مِنَ ٱلصَّٰلِحِينَ ﴿٥٠﴾

50. Waxaase doortay Allehiis wuxuuna ka dhigay kuwa wanaagsan.

وَإِن يَكَادُ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لَيُزۡلِقُونَكَ بِأَبۡصَٰرِهِمۡ لَمَّا سَمِعُواْ ٱلذِّكۡرَ وَيَقُولُونَ إِنَّهُۥ لَمَجۡنُونٞ ﴿٥١﴾

51. Waxay u dhow yihiin kuwii gaaloobay inay daymada kugu lagdaan markay maqlaan qur'aanka, waxayna dhihi waa waalan yahay (Nabigu).

وَمَا هُوَ إِلَّا ذِكۡرٞ لِّلۡعَٰلَمِينَ ﴿٥٢﴾

52. Quraanka iyo Nabiguna waa uun waanada caalamka.

Amarka Alle ayaa iska leh, ruux walbana suu doono yuu ku maamulaa, quraankana isagaa soo dejiyey Nabiguna ujuuro kama rabin cidna, waxaana had iyo jeer Alle fari jiray xaq sheegid iyo adkaysi iyo dulqaad, qur'aankuna waa raxmaddii Alle Nabiga u soo dhiibay, mana habboona in cidda akhriyi la guul guulo oo xumaan lagu tilmaamo, maxaa yeelay waa waanada adduunka dhammaan. Nabiguna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): Alle wuu u sugi daalimka markuu qabtana ma fakiyo. **[Al-Qalam: 44-52].**

Suurat Al-Xaaqqah

سُورَةُ الحَاقَّةِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

ٱلْحَآقَّةُ ﴿١﴾

1. Maalinta xaaqo (qiyaamadu waa wax sugan).

مَا ٱلْحَآقَّةُ ﴿٢﴾

2. Xaaqo maxay tahay.

وَمَآ أَدْرَىٰكَ مَا ٱلْحَآقَّةُ ﴿٣﴾

3. Maxaa ku ogeysiiyey xaaqo waxa ay tahay?

كَذَّبَتْ ثَمُودُ وَعَادٌۢ بِٱلْقَارِعَةِ ﴿٤﴾

4. Waxaa beeniyeen reer «Thamuud» iyo «Caadba» qiyaamada.

فَأَمَّا ثَمُودُ فَأُهْلِكُوا۟ بِٱلطَّاغِيَةِ ﴿٥﴾

5. Thamuudse waxaa lagu halligay qaylo daran.

وَأَمَّا عَادٌ فَأُهْلِكُوا۟ بِرِيحٍ صَرْصَرٍ عَاتِيَةٍ ﴿٦﴾

6. Caadna waxaa lagu halligay dabayl daran oo qabow.

سَخَّرَهَا عَلَيْهِمْ سَبْعَ لَيَالٍ وَثَمَٰنِيَةَ أَيَّامٍ ۖ حُسُومًا فَتَرَى ٱلْقَوْمَ فِيهَا صَرْعَىٰ كَأَنَّهُمْ أَعْجَازُ نَخْلٍ خَاوِيَةٍ ﴿٧﴾

7. Oo lagu diray korkooda toddoba habeen iyo siddeed maalmood oo israacsan, waxaadna arkaysaa iyagoo daadsan ood mooddo jirrid timir (dogob dhacay).

فَهَلْ تَرَىٰ لَهُم مِّنۢ بَاقِيَةٍ ﴿٨﴾

8. Wax ka hadhay miyaad aragtaa.

وَجَآءَ فِرْعَوْنُ وَمَن قَبْلَهُۥ وَٱلْمُؤْتَفِكَٰتُ بِٱلْخَاطِئَةِ ﴿٩﴾

9. Waxaa la yimid falkii danbiga ahaa: Fircoon iyo kuwii ka horreeyay iyo kuwii tuulooyinkooda la daba geddiyey (Nabi Luud qoomkiisii).

فَعَصَوْا۟ رَسُولَ رَبِّهِمْ فَأَخَذَهُمْ أَخْذَةً رَّابِيَةً ﴿١٠﴾

10. Waxay caasiyeen rusushii Rabbigood markaasuu si daran u qabtay.

إِنَّا لَمَّا طَغَا ٱلْمَآءُ حَمَلْنَٰكُمْ فِى ٱلْجَارِيَةِ ﴿١١﴾

11. Markay biyihii xad dhaafeen (waqtigii Nabi Nuux) waxaan idinku xambaarnay (awoowyaalkiin) doontii.

لِنَجْعَلَهَا لَكُمْ تَذْكِرَةً وَتَعِيَهَآ أُذُنٌ وَٰعِيَةٌ ﴿١٢﴾

12. Si aan uga yeelno waano ay una xafiddo dhag wax maqasha.

Qiyaamadu waa xaq sugan, ciddii xoog isbiddana oo xaqa iyo qiyaamada beenisana Alle ayaa ka awood badan, sida aayadahani noo caddeeyeen, sida qoomkii Nabi Saalax, Nabi Huud, Nabi Luud, Nabi Nuux iyo Fircoon iyo kuwii ka horreeyey. Waana in lagu waana qaato arrintaas, xumaanta xaq diidnimada iyo kibirkana la iska jiro waa sababaha halaaggee. Rasuulkuna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee): waxaa laygu gargaaray (dabaysha) saba, ree Caadna waxaa lagu halaagay (dabaysha) dabuur. **[Al-Xaaqqah: 1-12].**

فَإِذَا نُفِخَ فِى ٱلصُّورِ نَفْخَةٌ وَٰحِدَةٌ ﴿١٣﴾

13. Marka suurka la afuufo hal mar.

وَحُمِلَتِ ٱلْأَرْضُ وَٱلْجِبَالُ فَدُكَّتَا دَكَّةً وَٰحِدَةً ﴿١٤﴾

14. Dhulka iyo buurahana la xambaaro oo la burburiyo hal mar.

فَيَوْمَئِذٍ وَقَعَتِ ٱلْوَاقِعَةُ ﴿١٥﴾

15. Maalintaasay qiyaamadu dhacaysaa.

وَٱنشَقَّتِ ٱلسَّمَآءُ فَهِىَ يَوْمَئِذٍ وَاهِيَةٌ ﴿١٦﴾

16. Samaduna maalintaas way dillaaci wayna tabar yaraan.

وَٱلْمَلَكُ عَلَىٰٓ أَرْجَآئِهَا ۚ وَيَحْمِلُ عَرْشَ رَبِّكَ فَوْقَهُمْ يَوْمَئِذٍ ثَمَٰنِيَةٌ ﴿١٧﴾

17. Malaa'igtuna cirka gaararkiisa yey ahaan maalintaas, carshiga Alle na waxaa dadka korkiisa ku xambaari maalintaas siddeed malag.

يَوْمَئِذٍ تُعْرَضُونَ لَا تَخْفَىٰ مِنكُمْ خَافِيَةٌ ﴿١٨﴾

18. Maalintaasaa dadka loo soo bandhigi Alle wax xaggooda kaga qarsoonna ma jiro.

19. Ruuxiise kitaabkiisa midigta laga siiyo wuxuu dhihi (farax daraadiis) akhriya kitaabkayga.

فَأَمَّا مَنْ أُوتِيَ كِتَٰبَهُۥ بِيَمِينِهِۦ فَيَقُولُ هَآؤُمُ ٱقْرَءُوا۟ كِتَٰبِيَهْ ﴿١٩﴾

20. Waxaan yaqiinsanaa (adduunka) inaan la kulmi xisaabtayda.

إِنِّى ظَنَنتُ أَنِّى مُلَٰقٍ حِسَابِيَهْ ﴿٢٠﴾

21. Wuxuu ruuxaasi ku noolaan nolol laga raalli yahay.

فَهُوَ فِى عِيشَةٍ رَّاضِيَةٍ ﴿٢١﴾

22. Wuxuuna geli «janno» sarreeysa.

فِى جَنَّةٍ عَالِيَةٍ ﴿٢٢﴾

23. Midhaheeduna u dhaw yihiin (ruuxa guran).

قُطُوفُهَا دَانِيَةٌ ﴿٢٣﴾

24. Waxaana lagu dhihi cuna oo caba idinkoo shifaysan camalkaad hor marsateen ayaamihii tegay daraadiis (adduunkii).

كُلُوا۟ وَٱشْرَبُوا۟ هَنِيٓـًٔۢا بِمَآ أَسْلَفْتُمْ فِى ٱلْأَيَّامِ ٱلْخَالِيَةِ ﴿٢٤﴾

Alle isagaa awoodda leh abuurayna dunida, wuxuuna dadka u darbay maalinta qiyaame oo ruux walba laga abaal marin camalkiisii, waa maalinta dhulka, buuraha iyo cirkuba doorsoomi oo burburi, wax Alle ka qarsoomi ama ka fakanna uusan jirin, dadka wanaagsanna waxaa lagu abaal marin wanaag, janno, farax iyo bishaaro ku noolaansho.

Cumar binu Khadhaabna waxaa laga weriyay: xisaabiya naftiinna intaan la xisaabinin miisaamana intaan la miisaamin iyadaa idiin ka fudud xisaabta berriye, isuna qurxiya bandhigga wayn. **[Al-Xaaqqah: 13-24].**

25. Ruuxiise kitaabkiisa laga siiyo bidixda wuxuu dhahayaa magacayba'ee maan la i siinnin kitaabkayga.

وَأَمَّا مَنْ أُوتِيَ كِتَٰبَهُۥ بِشِمَالِهِۦ فَيَقُولُ يَٰلَيْتَنِى لَمْ أُوتَ كِتَٰبِيَهْ ﴿٢٥﴾

26. Xisaabtaydana maanan ogaannin.

وَلَمْ أَدْرِ مَا حِسَابِيَهْ ﴿٢٦﴾

27. Magacayba'ee maxaan u soo noolaaday.

يَٰلَيْتَهَا كَانَتِ ٱلْقَاضِيَةَ ﴿٢٧﴾

28. Xoolahaygi wax iima tarin.

مَآ أَغْنَىٰ عَنِّى مَالِيَهْ ﴿٢٨﴾

29. Waxaa lumay awooddaydii (iyo xujadaydii).

هَلَكَ عَنِّى سُلْطَٰنِيَهْ ﴿٢٩﴾

خُذُوهُ فَغُلُّوهُ ﴿٣٠﴾

30. Waxaa loo odhan qabta oo gacmihiisa iyo luquntiisa isku xira.

ثُمَّ ٱلْجَحِيمَ صَلُّوهُ ﴿٣١﴾

31. Naarta jahannamada geliya.

ثُمَّ فِي سِلْسِلَةٍ ذَرْعُهَا سَبْعُونَ ذِرَاعًا فَٱسْلُكُوهُ ﴿٣٢﴾

32. Markaas geliya silsilad toddobaatan dhudhun ah.

إِنَّهُۥ كَانَ لَا يُؤْمِنُ بِٱللَّهِ ٱلْعَظِيمِ ﴿٣٣﴾

33. Maxaa yeelay wuxuu ahaa kaan rumaynin Allaha weyn.

وَلَا يَحُضُّ عَلَىٰ طَعَامِ ٱلْمِسْكِينِ ﴿٣٤﴾

34. Aanna fari jirin in masaakiinta wax la siiyo.

فَلَيْسَ لَهُ ٱلْيَوْمَ هَٰهُنَا حَمِيمٌ ﴿٣٥﴾

35. Maanta (qiyaamada) kuma leh saaxiib.

وَلَا طَعَامٌ إِلَّا مِنْ غِسْلِينٍ ﴿٣٦﴾

36. Cunnana kuma leh aan ahayn dheecaanka «ehlu naarka».

لَّا يَأْكُلُهُۥٓ إِلَّا ٱلْخَٰطِـُٔونَ ﴿٣٧﴾

37. Cunnadaasna ma cuno kuwa gafay gaf weyn waxaan ahayn (gaalada).

فَلَآ أُقْسِمُ بِمَا تُبْصِرُونَ ﴿٣٨﴾

38. Waxaan ku dhaaran waxaad aragtaan (makhluuqaad ah).

وَمَا لَا تُبْصِرُونَ ﴿٣٩﴾

39. Iyo waxaydaan arkayninba.

إِنَّهُۥ لَقَوْلُ رَسُولٍ كَرِيمٍ ﴿٤٠﴾

40. Ee qur'aanku waa hadalkii Alle uu u soo dhiibay Rasuul sharaf leh.

وَمَا هُوَ بِقَوْلِ شَاعِرٍ ۚ قَلِيلًا مَّا تُؤْمِنُونَ ﴿٤١﴾

41. Hadal gabayaana ma aha, wax yar yaadse rumaynaysaan (xaqa).

وَلَا بِقَوْلِ كَاهِنٍ ۚ قَلِيلًا مَّا تَذَكَّرُونَ ﴿٤٢﴾

42. Hadal wax-sheegana ma aha wax yar yaadse waantoomaysaan.

تَنزِيلٌ مِّن رَّبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٤٣﴾

43. (Qur'aanku) wuxuu ka soo degay Rabbiga caalamka.

Xaqdiidayaasha waxaa lagu abaal marin maalinta qiyaame xumaantay kasbadeen, waxaana laga siin kitaabkooda xagga bidix, markaasay calaacali, waxaana la gelin naar daran oo cunno iyo cabid xun mooyee wax kale lahayn. Qur'aankuna waa hadalkii Alle, Rasuul sharaf leh yaana Alle ku soo dejiyey, xumaanta iyo ceebaha ay gaaladu ku sheegeenna waa ka fog yahay, waana dige iyo raxmadda caalamka. **[Al-Xaaqqah: 25-43].**

44. Hadduu nagu been abuurto (Nabi Muxamed).

وَلَوْ تَقَوَّلَ عَلَيْنَا بَعْضَ ٱلْأَقَاوِيلِ ﴿٤٤﴾

45. Waxaannu ku qaban gacan adag.

لَأَخَذْنَا مِنْهُ بِٱلْيَمِينِ ﴿٤٥﴾

46. Waxaannu gooynaynaa xididka wadnaha.

ثُمَّ لَقَطَعْنَا مِنْهُ ٱلْوَتِينَ ﴿٤٦﴾

47. Ruux idinka mid ah oo naga celinna ma jiro.

فَمَا مِنكُم مِّنْ أَحَدٍ عَنْهُ حَٰجِزِينَ ﴿٤٧﴾

48. Qur'aankuna waa waanada kuwa Alle ka dhawrsada.

وَإِنَّهُۥ لَتَذْكِرَةٌ لِّلْمُتَّقِينَ ﴿٤٨﴾

49. Waxaan ognahay inay idin ka mid yihiin kuwa beenin (qur'aanka).

وَإِنَّا لَنَعْلَمُ أَنَّ مِنكُم مُّكَذِّبِينَ ﴿٤٩﴾

50. Qur'aanku waa qoomammada gaalada (maalinta qiyaame).

وَإِنَّهُۥ لَحَسْرَةٌ عَلَى ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٥٠﴾

51. Qur'aanka waa run dhab ah.

وَإِنَّهُۥ لَحَقُّ ٱلْيَقِينِ ﴿٥١﴾

52. Ee Nabiyow u tasbiixso magaca Alle ee weyn.

فَسَبِّحْ بِٱسْمِ رَبِّكَ ٱلْعَظِيمِ ﴿٥٢﴾

Qur'aanku waa hadalkii Alle Nabiga Muxamad ah (naxariis iyo nabad gelyo korkiisa Alle ha yeelee) uu ku soo dejiyey, malaku Jibriilla soo gaarsiiyey, mana siyaadin karo, qur'aankuna waa waanada mu'miniinta iyo kuwa xumaanta ka dhawrsada, waana xujo iyo qoomamada gaalada, waana xaq sugan. Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: watiinku waa taxanaha qalbiga waana xididkuu ku xidhan yahay. **[Al-Xaaqqaah: 44-52].**

Suurat Al-Macaarij

سُورَةُ المَعَارِجِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

سَأَلَ سَآئِلٌۢ بِعَذَابٍ وَاقِعٍ ﴿١﴾

1. Midbaa wuxuu Alle warsaday in caddibaad ku dhacda gaalada (loo soo dedejiyo, iyadoo ay jeesjees ka tahay).

لِّلْكَٰفِرِينَ لَيْسَ لَهُۥ دَافِعٌ ﴿٢﴾

2. Caddibaadaasna wax gaaalada ka celin ma jiro.

مِّنَ ٱللَّهِ ذِى ٱلْمَعَارِجِ ﴿٣﴾

3. Waxayna ka imaan caddibaaddaasu Allaha sarraynta iyo sharafta u saaxiiba.

تَعْرُجُ ٱلْمَلَٰٓئِكَةُ وَٱلرُّوحُ إِلَيْهِ فِى يَوْمٍ كَانَ مِقْدَارُهُۥ خَمْسِينَ أَلْفَ سَنَةٍ ﴿٤﴾

4. Ee malaa'igta kale iyo Jibriilba u koraan maalin qaddarkeedu dhan yahay konton kun oo sano.

فَٱصْبِرْ صَبْرًا جَمِيلًا ﴿٥﴾

5. Ee Nabiyow samir samir wanaagsan.

إِنَّهُمْ يَرَوْنَهُۥ بَعِيدًا ﴿٦﴾

6. Gaaladu waxay caddibaadda u arkaan inay fog tahay.

وَنَرَىٰهُ قَرِيبًا ﴿٧﴾

7. Annaguna waxaan u aragnaa inay dhawdahay.

يَوْمَ تَكُونُ ٱلسَّمَآءُ كَٱلْمُهْلِ ﴿٨﴾

8. Caddibaaddaasu waxay dhici maalinta cirku noqon bir la dhalaaliyey oo kale.

وَتَكُونُ ٱلْجِبَالُ كَٱلْعِهْنِ ﴿٩﴾

9. Buuruhuna ay noqon suuf (la tifay oo kale).

وَلَا يَسْـَٔلُ حَمِيمٌ حَمِيمًا ﴿١٠﴾

10. Sokeeyana uusan sokeeye wax warsanaynin.

يُبَصَّرُونَهُمْ ۚ يَوَدُّ ٱلْمُجْرِمُ لَوْ يَفْتَدِى مِنْ عَذَابِ يَوْمِئِذٍۭ بِبَنِيهِ ﴿١١﴾

11. Wayna is arkayaan (qaraabadu), dambiiluhuna wuxuu jeclaan inuu iskaga furto maalintaas caddibaaddeeda carruurtiisa.

وَصَٰحِبَتِهِۦ وَأَخِيهِ ﴿١٢﴾

12. Haweenaydiisa, walaalkiis.

وَفَصِيلَتِهِ ٱلَّتِى تُـْٔوِيهِ ﴿١٣﴾

13. Iyo qaraabadiisii soo dhawaynaysay.

وَمَن فِى ٱلْأَرْضِ جَمِيعًا ثُمَّ يُنجِيهِ ﴿١٤﴾

14. Iyo waxa dhulka ku sugan dhammaan markaa uu ku nabad galo (isfurashadaas).

Ma habboona in caddibaad iyo halaag Alle la weydiisto, maxaa yeelay Alle isagaa awoodda leh, cidduu doono ayuuna ciqaabaa, markay ciqaabtiisu timaaddana wax celin ma jiro. Qiyaamada shiddadeedana wax walba wuu la doorsoomaa qaraabanimana ma jirto, wuxuuna jeclaan dambiiluhu inuu isku furto qaraabadiisa, xoolihiisa, dhulka waxa jooga oo dhan, markaana uu nabad galo, lagamase aqbalo. **[Al-Macaarij: 1-14].**

كَلَّآ ۖ إِنَّهَا لَظَىٰ ﴿١٥﴾

15. Saas ma aha ee waxaa jirta naar kulul (oo ay geli).

نَزَّاعَةً لِّلشَّوَىٰ ﴿١٦﴾

16. Waxayna siibi galka (madaxa iyo jirka).

تَدْعُوا۟ مَنْ أَدْبَرَ وَتَوَلَّىٰ ﴿١٧﴾

17. Waxayna u dhawaaqi dadka jeedsaday xaqana diiday.

وَجَمَعَ فَأَوْعَىٰٓ ﴿١٨﴾

18. Xoolahana kulmiyey oo hayey (oon xaqa ku bixinin).

* إِنَّ ٱلْإِنسَٰنَ خُلِقَ هَلُوعًا ﴿١٩﴾

19. Dadka waa la abuuray iyaga oo naf jaclaysi badan.

إِذَا مَسَّهُ ٱلشَّرُّ جَزُوعًا ﴿٢٠﴾

20. Haddii dhib taabto wuu argagaxaa.

وَإِذَا مَسَّهُ ٱلْخَيْرُ مَنُوعًا ﴿٢١﴾

21. Hadduu khayr helana wuu reebaa.

إِلَّا ٱلْمُصَلِّينَ ﴿٢٢﴾

22. Marka laga reebo muslimiinta tukata.

23. Ee ah kuwa salaaddooda daa'ima.

ٱلَّذِينَ هُمْ عَلَىٰ صَلَاتِهِمْ دَآئِمُونَ ﴿٢٣﴾

24. Kuwa xoolahoodana xaq la ogyahay ka bixiya.

وَٱلَّذِينَ فِىٓ أَمْوَٰلِهِمْ حَقٌّ مَّعْلُومٌ ﴿٢٤﴾

25. Siiyana kuwa baryootama iyo kuwaan wax haysan.

لِّلسَّآئِلِ وَٱلْمَحْرُومِ ﴿٢٥﴾

26. Kuwa rumeeya maalinta qiyaame (ee abaal marinta).

وَٱلَّذِينَ يُصَدِّقُونَ بِيَوْمِ ٱلدِّينِ ﴿٢٦﴾

27. Kuwa ka cabsaday, caddibaadda Rabbigood.

وَٱلَّذِينَ هُم مِّنْ عَذَابِ رَبِّهِم مُّشْفِقُونَ ﴿٢٧﴾

28. Maxaa yeelay caddibaadda Alle wax ka aammin ah ma jiro.

إِنَّ عَذَابَ رَبِّهِمْ غَيْرُ مَأْمُونٍ ﴿٢٨﴾

29. Kuwa ka ilaaliya xubinta (dhalmaha) sino.

وَٱلَّذِينَ هُمْ لِفُرُوجِهِمْ حَٰفِظُونَ ﴿٢٩﴾

30. Waxa ka soo haray xaaskooda ama ay hanteen, taasna laguma dagaalo.

إِلَّا عَلَىٰٓ أَزْوَٰجِهِمْ أَوْ مَا مَلَكَتْ أَيْمَٰنُهُمْ فَإِنَّهُمْ غَيْرُ مَلُومِينَ ﴿٣٠﴾

31. Ruuxiise doona wax gudubsan kuwaa waa mid xad gudbay.

فَمَنِ ٱبْتَغَىٰ وَرَآءَ ذَٰلِكَ فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْعَادُونَ ﴿٣١﴾

32. Kuwa waxa lagu aaminay iyo ballankaba ilaaliya.

وَٱلَّذِينَ هُمْ لِأَمَٰنَٰتِهِمْ وَعَهْدِهِمْ رَٰعُونَ ﴿٣٢﴾

33. Kuwa maraggooda si fiican u furay.

وَٱلَّذِينَ هُم بِشَهَٰدَٰتِهِمْ قَآئِمُونَ ﴿٣٣﴾

34. Kuwa salaaddooda xafida (dhawra).

وَٱلَّذِينَ هُمْ عَلَىٰ صَلَاتِهِمْ يُحَافِظُونَ ﴿٣٤﴾

35. Kuwaasi waxay geli jannooyin lagu sharrifo.

أُو۟لَٰٓئِكَ فِى جَنَّٰتٍ مُّكْرَمُونَ ﴿٣٥﴾

Alle wuxuu u darbay xaq diidayaasha naar daran oo jirka gubta, una yeedhi kii xaqa ka jeedsaday intuu adduunka joogay, waxaa kale oo ay aayaduhu sheegi in dadka dabeecaddiisu ay tahay in marka dhibaato heshana uu argagaxo markuu

nicmo helana uu xaqa diido hase yeeshee kuwa mu'miniinta ah ee salaadda tukada xoolahoodana xaqa ka bixiya qiyaamadana rumeeya caddibaadna ka cabsada, farjigooda xumaanta ka ilaaliya iyagu wey nabad geli waxaana lagu sharrifi jannada Alle, maxaa yeelay waa kuwo ballan Ilaahay oofiyey. **[Al-Macaarij: 15-35].**

فَمَالِ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ قِبَلَكَ مُهۡطِعِينَ ﴿٣٦﴾

36. Maxaa u sugnaaday gaalada oo ay xagga Nabiga u deg degi (iyagoo beenin kuna jeesjeesi isasoo bixinta).

عَنِ ٱلۡيَمِينِ وَعَنِ ٱلشِّمَالِ عِزِينَ ﴿٣٧﴾

37. Iyagoo midigta Nabiga iyo bidixdiisaba koox koox u jooga.

أَيَطۡمَعُ كُلُّ ٱمۡرِيٕٖ مِّنۡهُمۡ أَن يُدۡخَلَ جَنَّةَ نَعِيمٖ ﴿٣٨﴾

38. Ma wuxuu damci ruux kasta oo ka mid ah in la geliyo jannnatu naciima.

كَلَّآۖ إِنَّا خَلَقۡنَٰهُم مِّمَّا يَعۡلَمُونَ ﴿٣٩﴾

39. Saas ma aha ee waxaan ka abuurnay waxay ogyihiin.

فَلَآ أُقۡسِمُ بِرَبِّ ٱلۡمَشَٰرِقِ وَٱلۡمَغَٰرِبِ إِنَّا لَقَٰدِرُونَ ﴿٤٠﴾

40. Waxaan ku dhaaran qorrax ka soo baxyada iyo qorrax u dhacyada ee waan karraa.

عَلَىٰٓ أَن نُّبَدِّلَ خَيۡرٗا مِّنۡهُمۡ وَمَا نَحۡنُ بِمَسۡبُوقِينَ ﴿٤١﴾

41. Inaan ku baddallo kuwa ka khayr badan, nagamana dheerayn karaan.

فَذَرۡهُمۡ يَخُوضُواْ وَيَلۡعَبُواْ حَتَّىٰ يُلَٰقُواْ يَوۡمَهُمُ ٱلَّذِي يُوعَدُونَ ﴿٤٢﴾

42. Ee iska dhaaf ha dhumbadeen eh (xumaanta) hana ciyaareen intay kala kulmaan maalintoodii qiyaame ee loogu gooddiyey.

يَوۡمَ يَخۡرُجُونَ مِنَ ٱلۡأَجۡدَاثِ سِرَاعٗا كَأَنَّهُمۡ إِلَىٰ نُصُبٖ يُوفِضُونَ ﴿٤٣﴾

43. Maalinta ay ka soo bixi qubuuraha iyagoo deg degi ood mooddo inay u laxaadsan calaamo loo taagay (xaggeeda).

خَٰشِعَةً أَبۡصَٰرُهُمۡ تَرۡهَقُهُمۡ ذِلَّةٞۚ ذَٰلِكَ ٱلۡيَوۡمُ ٱلَّذِي كَانُواْ يُوعَدُونَ ﴿٤٤﴾

44. Araggooduna waa dullaysan yahay maalintaas, waxaana ka muuqda oo dabooli dulli,

maalintaasuna waa maalintii loogu yaboohay (abaal marinteeda).

Waxaa jirtay in xaqdiidayaashii reer Makaad ay Nabiga ku soo ururi jireen, iyagoo koox koox ah oo haddidaad iyo beenin ku dheehan, haddana damci inay wanaag iyo khayr helaan, waxaase wanaag hela ciddii kasbata, Alle na wuu karaa inuu halaago kuwa dambiilayaasha kuna baddalo kuwa ka khayr badan, hase ciyaaro oo dambi ha falo ciddii doonta waxay uun la kulmi doontaa maalinta abaal marinta ee dadka la soo bixin dambiilana dulli ka muuqdo, waa maalinta qiyaame. **[Al-Macaarij: 36-44].**

Suurat Nuux

سُورَةُ نُوحٍ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Annagaa Nabi Nuux u dirray qoomkiisii si uu ugu digo caddibaadda horteed.

إِنَّآ أَرْسَلْنَا نُوحًا إِلَىٰ قَوْمِهِۦٓ أَنْ أَنذِرْ قَوْمَكَ مِن قَبْلِ أَن يَأْتِيَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿١﴾

2. Wuxuuna ku yidhi qoomkayow waxaan idiin ahay dige cad «oo muuqda».

قَالَ يَٰقَوْمِ إِنِّى لَكُمْ نَذِيرٌ مُّبِينٌ ﴿٢﴾

3. Ee Alle caabuda kana dhawrsada, anigana i adeeca.

أَنِ ٱعْبُدُوا۟ ٱللَّهَ وَٱتَّقُوهُ وَأَطِيعُونِ ﴿٣﴾

4. Wuu idiin dambi dhaafi wuuna idin dib dhigi ilaa muddo magacaaban, marka Alle la yimaaddo ajasha wax dib u dhigi ma jiro haddaad wax og tihiin.

يَغْفِرْ لَكُم مِّن ذُنُوبِكُمْ وَيُؤَخِّرْكُمْ إِلَىٰٓ أَجَلٍ مُّسَمًّى ۚ إِنَّ أَجَلَ ٱللَّهِ إِذَا جَآءَ لَا يُؤَخَّرُ ۚ لَوْ كُنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿٤﴾

5. Nabi Nuux wuxuu yiri Rabbiyow waan u yeeray qoomkaygii habeen iyo dharaar.

قَالَ رَبِّ إِنِّى دَعَوْتُ قَوْمِى لَيْلًا وَنَهَارًا ﴿٥﴾

6. Yeedhiddayduna uma siyaadinnin waxaan carar ahayn.

فَلَمْ يَزِدْهُمْ دُعَآءِىٓ إِلَّا فِرَارًا ﴿٦﴾

7. Mar kasta oo aan u yeedhana si aad ugu dambi dhaafto waxay farahooda yeelaan dhagahooda, maryahoodana way isku dadaan, wayna ku madax adaygaan xumaanta, wayna is weyneeyaan.

وَإِنِّى كُلَّمَا دَعَوْتُهُمْ لِتَغْفِرَ لَهُمْ جَعَلُوٓا۟ أَصَٰبِعَهُمْ فِىٓ ءَاذَانِهِمْ وَٱسْتَغْشَوْا۟ ثِيَابَهُمْ وَأَصَرُّوا۟ وَٱسْتَكْبَرُوا۟ ٱسْتِكْبَارًا ﴿٧﴾

8. Si kor ah yaan ugu yeedhay, «dadka dhexdiisa».

ثُمَّ إِنِّي دَعَوْتُهُمْ جِهَارًا ﴿٨﴾

9. Waana u qaylyey, hoosna waan ugu yeeray.

ثُمَّ إِنِّي أَعْلَنتُ لَهُمْ وَأَسْرَرْتُ لَهُمْ إِسْرَارًا ﴿٩﴾

10. Waxaana ku idhi Allihiin dambi dhaaf weydiista waa dambi dhaaf badanee.

فَقُلْتُ ٱسْتَغْفِرُوا۟ رَبَّكُمْ إِنَّهُۥ كَانَ غَفَّارًا ﴿١٠﴾

11. Cirkana roob badan ha idiinka keenee.

يُرْسِلِ ٱلسَّمَآءَ عَلَيْكُم مِّدْرَارًا ﴿١١﴾

12. Hana idiin kordhiyo xoolo iyo wiilal iyo beero hana idiin yeelo wabiyaal.

وَيُمْدِدْكُم بِأَمْوَٰلٍ وَبَنِينَ وَيَجْعَل لَّكُمْ جَنَّٰتٍ وَيَجْعَل لَّكُمْ أَنْهَٰرًا ﴿١٢﴾

13. Maxaad leedihiin ood weynida Alle uga cabsoon weydeen.

مَّا لَكُمْ لَا تَرْجُونَ لِلَّهِ وَقَارًا ﴿١٣﴾

14. Isagoo idin abuuray idinkoo soo maray xaalado kala duwan.

وَقَدْ خَلَقَكُمْ أَطْوَارًا ﴿١٤﴾

Nabi Nuux wuxuu Alle u diray qoomkiisii si uu ugu digo hase yeeshee waa beeniyeen in kasta oo uu si walba ugu yeedhay, habeen iyo dharaar, kor iyo hoos, waxayna ahaayeen kuwa madax adag sida quraanku meela badan ku sheegay, dhagahayna furaysteen, dharkoodii bay isku duuduubeen si ayan xaqa u maqal, inkasta oo Nabigu ugu yeedhay xaqa. **[Nuux: 1-14].**

15. Miyaydaan arkaynin sida Alle u abuuray toddoba samo oo isdulsaaran.

أَلَمْ تَرَوْا۟ كَيْفَ خَلَقَ ٱللَّهُ سَبْعَ سَمَٰوَٰتٍ طِبَاقًا ﴿١٥﴾

16. Dayaxana uga yeelay dhexdooda nuur, qorraxdana ka yeelay siraad.

وَجَعَلَ ٱلْقَمَرَ فِيهِنَّ نُورًا وَجَعَلَ ٱلشَّمْسَ سِرَاجًا ﴿١٦﴾

17. Alle waa kan idinka soo bixiyay dhulka.

وَٱللَّهُ أَنۢبَتَكُم مِّنَ ٱلْأَرْضِ نَبَاتًا ﴿١٧﴾

18. Haddana idinku celin doona dhexdiisa idinkana soo bixin doona.

ثُمَّ يُعِيدُكُمْ فِيهَا وَيُخْرِجُكُمْ إِخْرَاجًا ﴿١٨﴾

وَٱللَّهُ جَعَلَ لَكُمُ ٱلْأَرْضَ بِسَاطًا ﴿١٩﴾

19. Alle waa kan idiinka yeelay dhulka gogol.

لِّتَسْلُكُوا۟ مِنْهَا سُبُلًا فِجَاجًا ﴿٢٠﴾

20. Si aad ugu socotaan dhexdiisa waddooyin waawayn.

Waa in dadku Alle ka yaabo, eegana siduu u abuuray, cirkana dayax nuurahayo iyo qorrax ifaysana ugu yeelay, dadkana dhulka ka soo bixiyay kuna celin doona markay dhintaan kana soo bixin doona waqtiga abaalmarinta, dhulkana gogol uga dhigay, waddooyinna uga jeexay ay danahooda ku qabsadaan, Allaha saas ah yay waajib tahay in kaligii la caabudo, luguna mahadiyo. **[Nuux: 15-20].**

قَالَ نُوحٌ رَّبِّ إِنَّهُمْ عَصَوْنِى وَٱتَّبَعُوا۟ مَن لَّمْ يَزِدْهُ مَالُهُۥ وَوَلَدُهُۥٓ إِلَّا خَسَارًا ﴿٢١﴾

21. (Nabi) Nuux wuxuu yidhi Allow way i caasiyeen waxayna raaceen kuwo aan xoolohoodu iyo carrurtoodu waxaan khasaara ahayn u kordhinaynin.

وَمَكَرُوا۟ مَكْرًا كُبَّارًا ﴿٢٢﴾

22. Dhagar waynna way dhakreen.

وَقَالُوا۟ لَا تَذَرُنَّ ءَالِهَتَكُمْ وَلَا تَذَرُنَّ وَدًّا وَلَا سُوَاعًا وَلَا يَغُوثَ وَيَعُوقَ وَنَسْرًا ﴿٢٣﴾

23. Waxay isu dheheen ha ka tagina ilaahyaalkiinna, hana ka tagina Wuddi iyo Suwaac iyo Yaguuth, iyo Yacuuq iyo Nasri.

وَقَدْ أَضَلُّوا۟ كَثِيرًا ۖ وَلَا تَزِدِ ٱلظَّٰلِمِينَ إِلَّا ضَلَٰلًا ﴿٢٤﴾

24. Waxayna dhumiyeen dad badan ee Allow ha u kordhinnin daalimiinta waxaan baadi ahayn.

مِّمَّا خَطِيٓـَٰٔتِهِمْ أُغْرِقُوا۟ فَأُدْخِلُوا۟ نَارًا فَلَمْ يَجِدُوا۟ لَهُم مِّن دُونِ ٱللَّهِ أَنصَارًا ﴿٢٥﴾

25. Gafkoodii dartiis yaa loo maansheeyay naarna loo galiyey, mana helayaan Alle ka soke gargaare.

وَقَالَ نُوحٌ رَّبِّ لَا تَذَرْ عَلَى ٱلْأَرْضِ مِنَ ٱلْكَٰفِرِينَ دَيَّارًا ﴿٢٦﴾

26. Nuux wuxuu yidhi Allow ha kaga tagin dhulka korkiisa gaalada ruuxna.

إِنَّكَ إِن تَذَرْهُمْ يُضِلُّوا۟ عِبَادَكَ وَلَا يَلِدُوٓا۟ إِلَّا فَاجِرًا كَفَّارًا ﴿٢٧﴾

27. Maxaa yeelay haddaad kaga tagto waxay dhumin addoomahaaga, mana dhalayaan waxaan gaal xun ahayn.

28. Rabbiyow u dambi dhaaf aniga iyo waalidiintay iyo ruuxii gala gurigeyga isagoo mu'min ah rag iyo haweenba, hana u kordhinnin daalimiinta waxaan halaag ahayn.

رَّبِّ ٱغۡفِرۡ لِي وَلِوَٰلِدَيَّ وَلِمَن دَخَلَ بَيۡتِيَ مُؤۡمِنٗا وَلِلۡمُؤۡمِنِينَ وَٱلۡمُؤۡمِنَٰتِۖ وَلَا تَزِدِ ٱلظَّٰلِمِينَ إِلَّا تَبَارٗا ٢٨

Qoomkii Nabi Nuux way beeniyeen xaqii, wayna caasiyeen, waxayna warkooda raaceen madaxdoodii xuma taliska ahayd, waxayna isfareen inayna ka tagin caabudidii ilaahyaalkoodii, dad badanna way dhumiyeen, dambigoodii dartiis yaana biyo loogu halaagay naarna loo galiyay, gargaare Alle ka soo hadhayna ma ayna helin, markaas Nabi Nuux wuu habaaray Alle na waa ka aqbalay, maxaa yeelay waxaan xumaan iyo fasaad ahayn ma ayna falayn, mu'miniintana wuu u duceeyay iyo intii raacdayba rag iyo haween, gaalana halaag yuu Alle u warsaday. Nabiguna wuxuu yidhi: (ha la saaxiibin waxaan mu'min ahayn, quudkaagana yuusan cunin ruuxaan Alle ka cabsade ahayn). Imaam Axmad, Abuu Daawuud, Tirmidi baa Abii Saciid ka wariyay. **[Nuux: 21-28].**

Suurat Al-Jinn

سُورَةُ الْجِنِّ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaad dhahdaa (Nabiyow) waxaa lay waxyooday inay dhagaysteen koox jinni ah (quraanka) dheheenna waxaan maqallay quraan la yaab leh.

قُلْ أُوحِيَ إِلَيَّ أَنَّهُ ٱسْتَمَعَ نَفَرٌ مِّنَ ٱلْجِنِّ فَقَالُوٓاْ إِنَّا سَمِعْنَا قُرْءَانًا عَجَبًا ﴿١﴾

2. Oo ku hanuunin xaqa waana rumaynay waxaan Alle cibaada la wadaajinaynana ma jiro.

يَهْدِيٓ إِلَى ٱلرُّشْدِ فَـَٔامَنَّا بِهِۦ ۖ وَلَن نُّشْرِكَ بِرَبِّنَآ أَحَدًا ﴿٢﴾

3. Waxaana sarreeya waynida iyo awoodda Alleheen, mana yeelan haweenay iyo ilmo midna.

وَأَنَّهُۥ تَعَٰلَىٰ جَدُّ رَبِّنَا مَا ٱتَّخَذَ صَٰحِبَةً وَلَا وَلَدًا ﴿٣﴾

4. Waxay ahaayeen kuwannagii xumaa kuwo Alle ku dhaha hadallo xadgudub ah.

وَأَنَّهُۥ كَانَ يَقُولُ سَفِيهُنَا عَلَى ٱللَّهِ شَطَطًا ﴿٤﴾

5. Waxaanna u malaynaynay inuusan insi iyo jinni midna Alle ku beensheegaynin.

وَأَنَّا ظَنَنَّآ أَن لَّن تَقُولَ ٱلْإِنسُ وَٱلْجِنُّ عَلَى ٱللَّهِ كَذِبًا ﴿٥﴾

6. Waxayna ahaayeen kuwo insiga ka mid ah inay magangalaan kuwo jinniga ka mida markaasna u kordhiyeen kibir (iyo xad gudub).

وَأَنَّهُۥ كَانَ رِجَالٌ مِّنَ ٱلْإِنسِ يَعُوذُونَ بِرِجَالٍ مِّنَ ٱلْجِنِّ فَزَادُوهُمْ رَهَقًا ﴿٦﴾

7. Waxayna jinnigu u maleeyeen sidaad u malayseen inaan Alle soo bixinaynin ruuxna.

وَأَنَّهُمْ ظَنُّواْ كَمَا ظَنَنتُمْ أَن لَّن يَبْعَثَ ٱللَّهُ أَحَدًا ﴿٧﴾

Suuraddani waxay ka sheekayn khalqiga ka mida makhluuqaadka Alle oo ah jinniga, mu'min iyo gaalbana leh, waxaana jirtay inay koox ka mid ihi dhagaysteen akhriska Nabiga, waana in la rumeeyo jiritaankooda, wax micna ah kuma jiro in la yidhaahdo ma aragno, maxaa yeelay imisaa wax aan la arkayn jira, ka warran naftaada iyo caqligaaga iyo dareenkaaga. **[Al-Jinn: 1-7].**

وَأَنَّا لَمَسْنَا ٱلسَّمَآءَ فَوَجَدْنَٰهَا مُلِئَتْ حَرَسًا شَدِيدًا وَشُهُبًا ﴿٨﴾

8. Waxaan doonnay samada waxaanna hellay iyadoo ka buuxda ilaalin daran iyo danabyo.

وَأَنَّا كُنَّا نَقْعُدُ مِنْهَا مَقَٰعِدَ لِلسَّمْعِ ۖ فَمَن يَسْتَمِعِ ٱلْـَٰٔنَ يَجِدْ لَهُۥ شِهَابًا رَّصَدًا ﴿٩﴾

9. Waxaanna ahayn kuwo fadhiista xaggeeda meelo si aan wax uga dhagaysanno ruuxiise dhagaysta hadda wuxuu heli «lana kulmi» danabyo darban.

وَأَنَّا لَا نَدْرِىٓ أَشَرٌّ أُرِيدَ بِمَن فِى ٱلْأَرْضِ أَمْ أَرَادَ بِهِمْ رَبُّهُمْ رَشَدًا ﴿١٠﴾

10. Mana ogin inay tahay shar lala doonay dadka dhulka ku nool ama in Rabbigood la doonay hanuun (iyo khayr).

وَأَنَّا مِنَّا ٱلصَّٰلِحُونَ وَمِنَّا دُونَ ذَٰلِكَ ۖ كُنَّا طَرَآئِقَ قِدَدًا ﴿١١﴾

11. Waxaa naga mid ah kuwo suubban iyo kuwo kaleba, waxaan nahay kooxa kala duwan.

وَأَنَّا ظَنَنَّآ أَن لَّن نُّعْجِزَ ٱللَّهَ فِى ٱلْأَرْضِ وَلَن نُّعْجِزَهُۥ هَرَبًا ﴿١٢﴾

12. Waxaanna ognahay inaannaan Alle ku daalin karin dhulka dhexdiisa, kuna daalinaynin cararid.

وَأَنَّا لَمَّا سَمِعْنَا ٱلْهُدَىٰٓ ءَامَنَّا بِهِۦ ۖ فَمَن يُؤْمِنۢ بِرَبِّهِۦ فَلَا يَخَافُ بَخْسًا وَلَا رَهَقًا ﴿١٣﴾

13. Markaan maqallay hanuunkana waan rumaynay, ruuxii rumeeya Rabbigiisna kama yaabo nusqaan iyo dulmi midna.

وَأَنَّا مِنَّا ٱلْمُسْلِمُونَ وَمِنَّا ٱلْقَٰسِطُونَ ۖ فَمَنْ أَسْلَمَ فَأُو۟لَٰٓئِكَ تَحَرَّوْا۟ رَشَدًا ﴿١٤﴾

14. Waxaa naga mida muslimiin iyo kuwo xadgudbay, ruuxiise islaama waa mid ku dadaalay hanuun.

وَأَمَّا ٱلْقَٰسِطُونَ فَكَانُوا۟ لِجَهَنَّمَ حَطَبًا ﴿١٥﴾

15. Kuwiise xadgudbay waxay ahaan qoryaha jahannamo.

16. Hadday ku toosaan dadku jidka (wanaagsan) waxaan ka waraabin lahayn biyo badan.

وَأَلَّوِ ٱسْتَقَٰمُوا۟ عَلَى ٱلطَّرِيقَةِ لَأَسْقَيْنَٰهُم مَّآءً غَدَقًا ﴿١٦﴾

17. Imtixaan dartiis, ruuxii ka jeedsada xusidda Allehiis wuxuu galin cadaab daran.

لِّنَفْتِنَهُمْ فِيهِ ۚ وَمَن يُعْرِضْ عَن ذِكْرِ رَبِّهِۦ يَسْلُكْهُ عَذَابًا صَعَدًا ﴿١٧﴾

Cirka Alle ayaa ilaaliyay, wax yeello iyo xumaanna looma gaysan karo, waxaana jirtay in jinnigu isku dayi jiray inuu dhagaysto hase ahaatee markii quraanka xaqa ahu soo dagay yaa Alle ka ilaaliyay, jinnigana saan soo sheegnay kuwo wanaagsan iyo kuwo xumba way leeyihiin, kuwooda wanaagsanna waxay qirteen inaan Alle la daalin karin xaqayna raaceen, kooda xunna uu noqon qoryaha jahannama, dadkuna hadday toosnaadaan Alle wuu u nicmayn, hadday jeedsadaanna wuu caddibi. **[Al-Jinn: 8-17].**

18. Masaajidda Alle ayaa iska leh ee ha kula baryina «caabudina» Alle cid kale.

وَأَنَّ ٱلْمَسَٰجِدَ لِلَّهِ فَلَا تَدْعُوا۟ مَعَ ٱللَّهِ أَحَدًا ﴿١٨﴾

19. Markuu istaagay addoonkii Alle (Nabigu) isagoo caabudi Alle waxay jinnigu u dhawaadeen inay korkiisa is dul fuulaan.

وَأَنَّهُۥ لَمَّا قَامَ عَبْدُ ٱللَّهِ يَدْعُوهُ كَادُوا۟ يَكُونُونَ عَلَيْهِ لِبَدًا ﴿١٩﴾

20. Waxaad dhahdaa Nabiyow waxaan uun caabudi Rabbigey lana wadaajin mahayo cidna.

قُلْ إِنَّمَآ أَدْعُوا۟ رَبِّى وَلَآ أُشْرِكُ بِهِۦٓ أَحَدًا ﴿٢٠﴾

21. Waxaad dhahdaa idiin ma hanto shar iyo khayr midna.

قُلْ إِنِّى لَآ أَمْلِكُ لَكُمْ ضَرًّا وَلَا رَشَدًا ﴿٢١﴾

22. Waxaad dhahdaa cidna igama korinayso Alle, mana helayo isaga ka sakow magangalyo.

قُلْ إِنِّى لَن يُجِيرَنِى مِنَ ٱللَّهِ أَحَدٌ وَلَنْ أَجِدَ مِن دُونِهِۦ مُلْتَحَدًا ﴿٢٢﴾

23. Hase yeeshee waxaan hantaa gaadhsiinta xaqa Alle iyo farriimihiisa, ruuxiise Alle caasiya iyo Rasuulkiisa waxaa u sugnaaday naarta jahannama isagoo ku waari dhexdeeda.

إِلَّا بَلَٰغًا مِّنَ ٱللَّهِ وَرِسَٰلَٰتِهِۦ ۚ وَمَن يَعْصِ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥ فَإِنَّ لَهُۥ نَارَ جَهَنَّمَ خَٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدًا ﴿٢٣﴾

حَتَّىٰٓ إِذَا رَأَوْا۟ مَا يُوعَدُونَ فَسَيَعْلَمُونَ مَنْ أَضْعَفُ نَاصِرًا وَأَقَلُّ عَدَدًا ﴿٢٤﴾

24. Markay gaaladu arkaan waxa loo yaboohi waxay ogaan cidda gargaarihiisu tabar yar yahay tirana yar.

قُلْ إِنْ أَدْرِىٓ أَقَرِيبٌ مَّا تُوعَدُونَ أَمْ يَجْعَلُ لَهُۥ رَبِّىٓ أَمَدًا ﴿٢٥﴾

25. Waxaad dhahdaa ma ogi inuu dhaw yahay waxa la idiinku gooddin ama Rabbigey waqti u yeeli.

عَٰلِمُ ٱلْغَيْبِ فَلَا يُظْهِرُ عَلَىٰ غَيْبِهِۦٓ أَحَدًا ﴿٢٦﴾

26. Alle ayaa og waxa maqan, umana muujiyo waxaa maqan ruuxna.

إِلَّا مَنِ ٱرْتَضَىٰ مِن رَّسُولٍ فَإِنَّهُۥ يَسْلُكُ مِنۢ بَيْنِ يَدَيْهِ وَمِنْ خَلْفِهِۦ رَصَدًا ﴿٢٧﴾

27. Marka laga reebo cidduu ka raalli noqday oo rasuul ah isagoo hor iyo gadaalba ka ilaalin.

لِّيَعْلَمَ أَن قَدْ أَبْلَغُوا۟ رِسَٰلَٰتِ رَبِّهِمْ وَأَحَاطَ بِمَا لَدَيْهِمْ وَأَحْصَىٰ كُلَّ شَىْءٍ عَدَدًۢا ﴿٢٨﴾

28. Si Alle u ogaado inay gaadhsiiyeen farriimihii Rabbigood, Alle na waa koobay waxa agtooda ah wayna u tirakooban yihiin wax walba.

Masaajidda Alle ayaa iska leh, laguna caabudaa, waase inaan cid kale lugu baryin luguna caabudin, Alle na wuxuu faray Nabiga inuu u sheego dadka inuu Alle kaliya caabudi, shar iyo khayrna uusan hanannin, wax Alle ka soo hadhay oo uu magangalina uusan jirin, hasa yeeshee uu hanto xaqa iyo farriinta Alle oo uu dadka gaadhsiiyo, ruuxiise Alle iyo Rasuulka caasiya wuxuu gali naar, gargaarana ma helo, waxa maqanna Alle umbaa og inuu dhawyahay iyo in kale iyo goortuu iman, hasa yeeshee Alle rasuulladiisa uu ka raalli noqday umbuu waxyi wax ku ogaysiiyaa isagoo ilaalin si ay u gaadhsiiyaan farriinta Rabbigood, Alle na wax walba wuu koobay. Qataada wuxuu yidhi: yuhuud iyo nasaara waxay ahaayeen kuwii Alle wax la wadaajiya, markaasaa Alle faray Nabiga in Alle kaliya la caabudo. **[Al-Jinn: 18-28].**

Suurat Al-Muzzammil

سُورَةُ ٱلْمُزَّمِّلِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. (Nabiga) isduuduubayow.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلْمُزَّمِّلُ ﴿١﴾

2. Istaag habeenka (tuko) wax yar mooyee.

قُمِ ٱلَّيْلَ إِلَّا قَلِيلًا ﴿٢﴾

3. Nuskiisa tuko ama ka nusqaami wax yar.

نِّصْفَهُۥٓ أَوِ ٱنقُصْ مِنْهُ قَلِيلًا ﴿٣﴾

4. Ama ka badi. Quraanka u akhri si fiican.

أَوْ زِدْ عَلَيْهِ وَرَتِّلِ ٱلْقُرْءَانَ تَرْتِيلًا ﴿٤﴾

5. Annagaa kugu dajin hadal culus (wayne).

إِنَّا سَنُلْقِى عَلَيْكَ قَوْلًا ثَقِيلًا ﴿٥﴾

6. Habeenka saacadihiisa (oo la tukado) yaa ku daran khushuucda aadna u toosan.

إِنَّ نَاشِئَةَ ٱلَّيْلِ هِىَ أَشَدُّ وَطْئًا وَأَقْوَمُ قِيلًا ﴿٦﴾

7. Maalintii waxaa kuu sugnaaday shaqa dheer.

إِنَّ لَكَ فِى ٱلنَّهَارِ سَبْحًا طَوِيلًا ﴿٧﴾

8. Magaca Alle na xus cibaadadiisana u go'.

وَٱذْكُرِ ٱسْمَ رَبِّكَ وَتَبَتَّلْ إِلَيْهِ تَبْتِيلًا ﴿٨﴾

9. Qorrax ka soo bax iyo u dhacba Alle ayaa iska leh, isaga mooyee ilaah kale xaq luguma caabudo ee ka yeelo wakiil (la cuskado).

رَّبُّ ٱلْمَشْرِقِ وَٱلْمَغْرِبِ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ فَٱتَّخِذْهُ وَكِيلًا ﴿٩﴾

10. Kuna samir waxay sheegi gaaladu, si quruxsanna uga hijroo (iskaga tag).

وَٱصْبِرْ عَلَىٰ مَا يَقُولُونَ وَٱهْجُرْهُمْ هَجْرًا جَمِيلًا ﴿١٠﴾

11. Isu kaanna daa aniga iyo kuwa beeniyay xaqa ee nicmaysan wax yarna sug.

وَذَرْنِى وَٱلْمُكَذِّبِينَ أُو۟لِى ٱلنَّعْمَةِ وَمَهِّلْهُمْ قَلِيلًا ﴿١١﴾

إِنَّ لَدَيْنَآ أَنكَالًا وَجَحِيمًا ﴿١٢﴾

12. Agtannada waxaa ah caddibaad iyo naarta jaxiimo.

وَطَعَامًا ذَا غُصَّةٍ وَعَذَابًا أَلِيمًا ﴿١٣﴾

13. Iyo cunno lagu margado iyo cadaab daran.

يَوْمَ تَرْجُفُ ٱلْأَرْضُ وَٱلْجِبَالُ وَكَانَتِ ٱلْجِبَالُ كَثِيبًا مَّهِيلًا ﴿١٤﴾

14. (Waxay ku dhici arrintaasu) maalinta dhulka iyo buuruhu gilgilan, buuruhuna ay noqon tamuux socda*.

Nabiga «naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee» wuxuu Alle faray inuu xaqa gaadhsiiyo dadka, cibaadadana badiyo gaar ahaan habeenkii wuxuuna ku mannaystay inuu ku dajiyay quraan sharaf leh, wuxuuna faray inuu badiyo xuska Alle iyo cibaadadiisa, maxaa yeelay adduunka Alle ayaa iska leh. isaga mooyee ilaah kale oo xaq lagu caabudo ma jiro, waxaa kaloos faray inuu Alle tala saarto dhibkana u adkaysto gaaladana ka hijroodo isuna daayo iyaga iyo Alle wax yarna sugo, maxaa yeelay Alle agtiisa yaa cadaab iyo ciqaab u taallaa gaalada maalinta qiyaame. **[Al-Muzzammil: 1-14].**

** Bacaad daadanaya oon lugta celinayn (dib u eegaha).*

إِنَّآ أَرْسَلْنَآ إِلَيْكُمْ رَسُولًا شَٰهِدًا عَلَيْكُمْ كَمَآ أَرْسَلْنَآ إِلَىٰ فِرْعَوْنَ رَسُولًا ﴿١٥﴾

15. Annagaa idiin dirray Rasuul idinku markhaati ah, sidaan ugu dirray fircoonba rasuul.

فَعَصَىٰ فِرْعَوْنُ ٱلرَّسُولَ فَأَخَذْنَٰهُ أَخْذًا وَبِيلًا ﴿١٦﴾

16. Fircoonna wuu caasiyay rasuulkii (Nabi Muuse), Fircoonna waxaan ku qabannay qabasha daran.

فَكَيْفَ تَتَّقُونَ إِن كَفَرْتُمْ يَوْمًا يَجْعَلُ ٱلْوِلْدَٰنَ شِيبًا ﴿١٧﴾

17. Ee seebaad gaalooy uga dhawrsanaysaan caddibaadda maalinta qiyaame ee carruurta cirroole ka yeeli haddaad gaalawdaan.

ٱلسَّمَآءُ مُنفَطِرٌۢ بِهِۦ ۚ كَانَ وَعْدُهُۥ مَفْعُولًا ﴿١٨﴾

18. Samaduna maalintaas darteed ay la dildillaaci, ballanqaadka Alle na waa wax dhici.

إِنَّ هَٰذِهِۦ تَذْكِرَةٌ ۖ فَمَن شَآءَ ٱتَّخَذَ إِلَىٰ رَبِّهِۦ سَبِيلًا ﴿١٩﴾

19. Aayadahani waa waano, ee ruuxii doona Rabbigiis xaggiisa jid ha uga yeesho.

Diridda Rasuulku ma aha wax gaar ku ahayd Nabiga, ee waxaa jiray in Alle diray Nabiyo iyo rasuullo badan sidii Nabi Muusihii fircoon loo diray oo is kibriyay oo beeniyay Alle na ciqaab daran ciqaabay, ruuxii wax garad ahse waa inuu waano qaato una darbado maalinta qiyaame ee dhibka badan, Alle xaggiisana jid fiican uga samaysto. **[Al-Muzzammil: 15-19].**

إِنَّ رَبَّكَ يَعْلَمُ أَنَّكَ تَقُومُ أَدْنَىٰ مِن ۞
ثُلُثَيِ ٱلَّيْلِ وَنِصْفَهُۥ وَثُلُثَهُۥ وَطَآئِفَةٌ
مِّنَ ٱلَّذِينَ مَعَكَ ۚ وَٱللَّهُ يُقَدِّرُ ٱلَّيْلَ
وَٱلنَّهَارَ ۚ عَلِمَ أَن لَّن تُحْصُوهُ فَتَابَ
عَلَيْكُمْ ۖ فَٱقْرَءُوا۟ مَا تَيَسَّرَ مِنَ ٱلْقُرْءَانِ ۚ
عَلِمَ أَن سَيَكُونُ مِنكُم مَّرْضَىٰ
وَءَاخَرُونَ يَضْرِبُونَ فِى ٱلْأَرْضِ يَبْتَغُونَ
مِن فَضْلِ ٱللَّهِ وَءَاخَرُونَ يُقَٰتِلُونَ
فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ ۖ فَٱقْرَءُوا۟ مَا تَيَسَّرَ
مِنْهُ ۚ وَأَقِيمُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ وَءَاتُوا۟ ٱلزَّكَوٰةَ
وَأَقْرِضُوا۟ ٱللَّهَ قَرْضًا حَسَنًا ۚ وَمَا تُقَدِّمُوا۟
لِأَنفُسِكُم مِّنْ خَيْرٍ تَجِدُوهُ عِندَ ٱللَّهِ
هُوَ خَيْرًا وَأَعْظَمَ أَجْرًا ۚ وَٱسْتَغْفِرُوا۟
ٱللَّهَ ۖ إِنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٢٠﴾

20. Allehaa wuxuu ogyahay Nabiyow inaad tukatid wax ka yar habeenka saddex meelood laba ama habeenka badhkiis ama habeenka saddex meelood meel, iyo in koox ka mida kuwa kula jira ay tukato, Alle na waa u qadaran yahay habeenka iyo maalintuba, wuxuuna ogyahay inaydaan koobi karin, wuuna idinka toobad aqbalay ee akhriya wixii idiin fududaada oo quraan ah, wuxuu Alle ogyahay inay idin ka mid noqon kuwa buka iyo kuwo safri iyagoo dooni khayrka Alle iyo kuwo u dagaallami jidka Alle ee akhriya wixii idiin fududaada oo quraan ah, salaaddana ooga zakadana bixiya Alle na wax wanaagsan daynsada waxaad naftiinna u hormarsataan oo khayr ahna waxaad ka ogaan doontaan kana heleysaan Alle agtiisa isagoo khayr ah iyo ajri wayn, ee Alle dambi dhaaf waydiista waa dambi dhaafe naxariistee.

Alle waa ogyahay camalkeenna iyo dhaqdhaqaaqeenna habeen iyo dharaarba, waxaana laga rabaa ruuxa mu'minka ah inuu Alle ku xidhnaado oo toobad keeno, quraankana akhriyo, camalkiisuna noqdo mid habaysan oon ahayn mashaqo iyo dhibaato, illeen waxaa lagu shuqloomi karaa, jirro iyo tijaaro xalaal ah, waase in Alle si joogta ah loo caabudo, salaadda, zakada iyo khayrkana la hormarsadaa si wanaag, ajri iyo dambi dhaaf Alle agtiisa looga helo. **[Al-Muzzammil: 20].**

Suurat Al-Muddathir

سُورَةُ المُدَّثِّرِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

يَٰٓأَيُّهَا ٱلْمُدَّثِّرُ ﴿١﴾

1. (Nabiga) isdadayow.

قُمْ فَأَنذِرْ ﴿٢﴾

2. Istaag oo dig.

وَرَبَّكَ فَكَبِّرْ ﴿٣﴾

3. Rabbigaana waynee.

وَثِيَابَكَ فَطَهِّرْ ﴿٤﴾

4. Dharkaagana daahiri.

وَٱلرُّجْزَ فَٱهْجُرْ ﴿٥﴾

5. Xumaantana ka hijroo (iyo sanamyada).

وَلَا تَمْنُن تَسْتَكْثِرُ ﴿٦﴾

6. Hana ku mannaysan adoo badsan (waxaad bixisay).

وَلِرَبِّكَ فَٱصْبِرْ ﴿٧﴾

7. Allehaa dartiisna u samir.

فَإِذَا نُقِرَ فِى ٱلنَّاقُورِ ﴿٨﴾

8. Marka suurka (qiyaame) la afuufo.

فَذَٰلِكَ يَوْمَئِذٍ يَوْمٌ عَسِيرٌ ﴿٩﴾

9. Maalintaasu waa maalin ku daran.

عَلَى ٱلْكَٰفِرِينَ غَيْرُ يَسِيرٍ ﴿١٠﴾

10. Gaalada oon u fududayn.

ذَرْنِى وَمَنْ خَلَقْتُ وَحِيدًا ﴿١١﴾

11. Isu kaanna daa aniga iyo kaan abuuray isaga oo kaligiisa.

وَجَعَلْتُ لَهُۥ مَالًا مَّمْدُودًا ﴿١٢﴾

12. Una yeelay xoolo badan.

وَبَنِينَ شُهُودًا ﴿١٣﴾

13. Iyo wiilal jooga oo «darban».

وَمَهَّدتُّ لَهُۥ تَمْهِيدًا ﴿١٤﴾

14. Aan una waasiciyay risqiga.

ثُمَّ يَطْمَعُ أَنْ أَزِيدَ ﴿١٥﴾

15. Oo haddana sii damci inaan u badiyo.

16. Saas maaha, ee kaas wuxuu diiday aayaadkannaga.

كَلَّآۖ إِنَّهُۥ كَانَ لِـَٔايَٰتِنَا عَنِيدًا ﴿١٦﴾

17. Waxaana ku kallifi (ku dhibi) cadaab daran.

سَأُرْهِقُهُۥ صَعُودًا ﴿١٧﴾

Waxaa sugnaatay in Rasuulku (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) markuu waxyigu ku billawday uu is daday isagoo naxsan, markaas Alle faray inuu kaco dadkana u digo, Alle na wayneeyo, nadaafadana ku dadaalo, xumaantana ka fogaado, wuxuu bixiyana uusan sheegsheegin, dar Alle na u samro, mu'minka dhabta ahna saasaa laga rabaa, markase qiyaamadu timaaddo gaalo waxay la kulmi dhib iyo halaag, mana habboona in Allihii ku abuuray ee kuu nicmeeyay eed waliba ka doonayso kordhin aad ka gaalawdid xaqiisana ka madax adaygtid, sida gaalka aayaduhu tilmaameen. **[Al-Muddathir: 1-17].**

18. Gaalkaasu wuu fikiray wax buuna goostay.

إِنَّهُۥ فَكَّرَ وَقَدَّرَ ﴿١٨﴾

19. Waxaana loo lacnaday siduu wax u goostay.

فَقُتِلَ كَيْفَ قَدَّرَ ﴿١٩﴾

20. Haddana waxaa loo lacnaday siduu wax u goostay.

ثُمَّ قُتِلَ كَيْفَ قَدَّرَ ﴿٢٠﴾

21. Kadib wuxuu eegay (si uu quraanka u wax yeelleeyo).

ثُمَّ نَظَرَ ﴿٢١﴾

22. Wuuna waji macbuusay oo uruuriyay.

ثُمَّ عَبَسَ وَبَسَرَ ﴿٢٢﴾

23. Markaasuu jeedsaday oo is kibriyay.

ثُمَّ أَدْبَرَ وَٱسْتَكْبَرَ ﴿٢٣﴾

24. Isagoo dhihi quraankani ma aha waxaan sixir la soo guuriyay ahayn.

فَقَالَ إِنْ هَٰذَآ إِلَّا سِحْرٌ يُؤْثَرُ ﴿٢٤﴾

25. Quraankani ma aha waxaan hadal bashar ahayn.

إِنْ هَٰذَآ إِلَّا قَوْلُ ٱلْبَشَرِ ﴿٢٥﴾

26. Waxaannu galin kaas (naarta) saqara.

سَأُصْلِيهِ سَقَرَ ﴿٢٦﴾

27. Ma taqaannaa naarta saqara.

وَمَآ أَدْرَىٰكَ مَا سَقَرُ ﴿٢٧﴾

28. Hilib iyo laf midna ma reebto.
29. Waxayna doorisaa jidhka (oy gubtaa).
30. Waxaana kor jooga (ka shaqeeya) sagaal iyo toban malag (ama saf)

لَا تُبۡقِي وَلَا تَذَرُ ﴿٢٨﴾
لَوَّاحَةٌ لِّلۡبَشَرِ ﴿٢٩﴾
عَلَيۡهَا تِسۡعَةَ عَشَرَ ﴿٣٠﴾

Xaqoo la raaco yaa habboon, ruuxiise ka horyimaada oo xumaan iyo dhagar maamula wuxuu la kulmi dhibaato iyo guul darro, sidii ku dhacday gaalkii Waliid binu Muqiira ahaa ee dulloobay laguna dilay dagaalkii waynaa ee badar, Alle na wuxuu ugu goodiyay kaas iyo wixii camalkiisa fala naar daran oo laf iyo lud midna aan reebaynin, malaa'igtuna waa junuudda Alle ee naarta ka shaqaysa si loo ciqaabo dambiilayaasha, Alle ha naga koriyee. **[Al-Muddathir: 18-30].**

31. Ugama aannaan yeelin naarta kuwa ka shaqeeya malaa'ig, tirana uma aannaan yeelin inay gaaladu ku fidnoobaan mooyeen, iyo inay yaqiinsadaan kuwa kitaabka la siiyay, iyo inay kordhistaan kuwii xaqa rumeeyay iimaan, ayna shakiyinna kuwii kitaabka la siiyay iyo mu'miniintu, iyo inay dhahaan kuwa qalbiga ka buka iyo gaaladu Alle muxuu uga jeedaa tusaalahan, saasaa Alle u dhumiyaa ruuxuu doono, una hanuuniyaa ruuxuu doono, wax og junuudda Alle oon isaga ahaynna ma jiro, waxan la soo sheegayna ma aha waano dadka mooyee.
32. Waxaa sugan dayaxa ku dhaartaye.
33. Iyo habeenku markuu jeedsado.
34. Iyo subaxu markuu iftiimo.

وَمَا جَعَلۡنَآ أَصۡحَٰبَ ٱلنَّارِ إِلَّا مَلَٰٓئِكَةٗۙ
وَمَا جَعَلۡنَا عِدَّتَهُمۡ إِلَّا فِتۡنَةٗ لِّلَّذِينَ
كَفَرُواْ لِيَسۡتَيۡقِنَ ٱلَّذِينَ أُوتُواْ ٱلۡكِتَٰبَ
وَيَزۡدَادَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِيمَٰنٗا وَلَا يَرۡتَابَ
ٱلَّذِينَ أُوتُواْ ٱلۡكِتَٰبَ وَٱلۡمُؤۡمِنُونَ
وَلِيَقُولَ ٱلَّذِينَ فِي قُلُوبِهِم مَّرَضٞ
وَٱلۡكَٰفِرُونَ مَاذَآ أَرَادَ ٱللَّهُ بِهَٰذَا مَثَلٗاۚ
كَذَٰلِكَ يُضِلُّ ٱللَّهُ مَن يَشَآءُ وَيَهۡدِي
مَن يَشَآءُۚ وَمَا يَعۡلَمُ جُنُودَ رَبِّكَ إِلَّا هُوَۚ
وَمَا هِيَ إِلَّا ذِكۡرَىٰ لِلۡبَشَرِ ﴿٣١﴾

كَلَّا وَٱلۡقَمَرِ ﴿٣٢﴾
وَٱلَّيۡلِ إِذۡ أَدۡبَرَ ﴿٣٣﴾
وَٱلصُّبۡحِ إِذَآ أَسۡفَرَ ﴿٣٤﴾

إِنَّهَا لَإِحْدَى ٱلْكُبَرِ ﴿٣٥﴾

35. Ee naarta saqara waa waxyaalaha waawayn midkood (balaayooyinka).

نَذِيرًا لِّلْبَشَرِ ﴿٣٦﴾

36. Waana digniinta dadka.

لِمَن شَآءَ مِنكُمْ أَن يَتَقَدَّمَ أَوْ يَتَأَخَّرَ ﴿٣٧﴾

37. Ruuxii doona inuu hormaro, iyo ruuxii doona inuu dib u dhaco, (waa loo digay).

Alle wuxuu doonuu falaa, naarta cidda ka shaqaynna wuxuu ka dhigay malaa'ig, si ciddii doontana ay u hanuunto ciddii doontana u dhunto, junuudda Alleheen iyo ciidammadiisana isaga umbaa og, aayadaha la soo sheegayna waa digniinta dadka, Alle na wuxuu ku dhaartay dayaxa, habeenku markuu jeedsado, subaxu markuu iftiimo in naarta saqara ay ka mid tahay balaayooyinka waawayn iyo digniinta dadka ruuxii doona inuu hormaro iyo kii doona inuu dib u dhacaba. Tafsiirka baxrul-muxiidh waxaa lagu sheegay in horumarka iyo dibu dhaca loola jeedo khayrkoo lagu hormaro iyo isagoo laga dib dhaco. Ibnu Cabbaasna wuxuu yidhi ruuxii doona ha raaco daacada Alle, kii doonana ha ka dibdhaco. **[Al-Muddathir: 31-37].**

كُلُّ نَفْسٍ بِمَا كَسَبَتْ رَهِينَةٌ ﴿٣٨﴾

38. Naf walba waxay u xidhan tahay waxay camal fashay.

إِلَّآ أَصْحَٰبَ ٱلْيَمِينِ ﴿٣٩﴾

39. Hase yeeshee kuwa midigta mari (ehlu khayrka)

فِى جَنَّٰتٍ يَتَسَآءَلُونَ ﴿٤٠﴾

40. Waxay gali jannooyin, waxayna iswaydiin.

عَنِ ٱلْمُجْرِمِينَ ﴿٤١﴾

41. Dambiilayaasha.

مَا سَلَكَكُمْ فِى سَقَرَ ﴿٤٢﴾

42. Iyagoo ku dhihi maxaa idin galiyay naarta saqara.

قَالُوا۟ لَمْ نَكُ مِنَ ٱلْمُصَلِّينَ ﴿٤٣﴾

43. Waxayna ugu jawaabi ka mid ma aannaan ahayn kuwa tukada.

وَلَمْ نَكُ نُطْعِمُ ٱلْمِسْكِينَ ﴿٤٤﴾

44. Mana aannaan ahayn kuwa quudiya miskiinka.

وَكُنَّا نَخُوضُ مَعَ ٱلْخَآئِضِينَ ﴿٤٥﴾

45. Waxaanna ahayn kuwa la dhumbada kuwa xumaanta dhumban.

46. Waxaanna ahayn kuwa beeniya maalinta abaalmarinta (qiyaamada).

وَكُنَّا نُكَذِّبُ بِيَوْمِ ٱلدِّينِ ﴿٤٦﴾

47. Ilaa ay dhabtu nooga timaado (geeridu).

حَتَّىٰٓ أَتَىٰنَا ٱلْيَقِينُ ﴿٤٧﴾

48. Ma anfacayso kuwaas shafeecada kuwa shafeeca.

فَمَا تَنفَعُهُمْ شَفَٰعَةُ ٱلشَّٰفِعِينَ ﴿٤٨﴾

49. Maxaase u sugnaaday oy waanada uga jeedsadaan.

فَمَا لَهُمْ عَنِ ٱلتَّذْكِرَةِ مُعْرِضِينَ ﴿٤٩﴾

50. Ood u mooddaa dameero diday.

كَأَنَّهُمْ حُمُرٌ مُّسْتَنفِرَةٌ ﴿٥٠﴾

51. Oo ka cararay libaax.

فَرَّتْ مِن قَسْوَرَةٍ ﴿٥١﴾

52. Haddana wuxuu dooni midkasta oo ka mida warqado qoran (kitaab).

بَلْ يُرِيدُ كُلُّ ٱمْرِئٍ مِّنْهُمْ أَن يُؤْتَىٰ صُحُفًا مُّنَشَّرَةً ﴿٥٢﴾

53. Saas ma aha ee kama yaabayaan aakhiro.

كَلَّا ۖ بَل لَّا يَخَافُونَ ٱلْءَاخِرَةَ ﴿٥٣﴾

54. Waxaa sugan in quraanku waana yahay.

كَلَّآ إِنَّهُۥ تَذْكِرَةٌ ﴿٥٤﴾

55. Ruuxii doona yaana waantoobi.

فَمَن شَآءَ ذَكَرَهُۥ ﴿٥٥﴾

56. Mana waantoobayaan in Alle doona mooyee, Alle na wuxuu mutaa in laga dhawrsado, wuxuuna ehel u yahay inuu dambi dhaafo.

وَمَا يَذْكُرُونَ إِلَّآ أَن يَشَآءَ ٱللَّهُ ۚ هُوَ أَهْلُ ٱلتَّقْوَىٰ وَأَهْلُ ٱلْمَغْفِرَةِ ﴿٥٦﴾

Naf walba waxaa laga abaal marin waxay kasbatay, khayr iyo sharba, hase yeeshee ehlu jannuhu waxay waydiin ehlu naarka waxa naarta galiyay, waxayna ugu jawaabi: inayna tukan jirin, miskiinna quudin jirin, xumaantana tiimban jireen, qiyaamadana beenin jireen inta dhabtu uga timaaddo, kuwaas shafeeco wax uma tarto, maxaa yeelay xaqay ka jeedsadeen iyagood mooddo dameero bahal ka cararay, haddana midkastoo ka mida gaalada wuxuu dooni in warqad qoran samada looga soo dajiyo, dhabahaantuse waa inayna aakhiro ka yaabaynin, quraankuna waana yahay, ruuxii doonana waantoobi, awooddana Allaha in laga cabsado muta dambi dhaafna ehel u ah yaa iska leh. **[Al-Muddathir: 38-56].**

Suurat Al-Qiyaamah

سُورَةُ ٱلْقِيَامَةِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaan ku dhaaran maalinta qiyaame.

لَآ أُقْسِمُ بِيَوْمِ ٱلْقِيَٰمَةِ ﴿١﴾

2. Waxaan ku dhaaran (oo kale) nafta dagaasha (saaxiibkeed) (ee waa la idin soo bixin).

وَلَآ أُقْسِمُ بِٱلنَّفْسِ ٱللَّوَّامَةِ ﴿٢﴾

3. Ma wuxuu u maleeyay dadku inaanaan kulminaynin lafihiisa.

أَيَحْسَبُ ٱلْإِنسَٰنُ أَلَّن نَّجْمَعَ عِظَامَهُۥ ﴿٣﴾

4. Saas ma aha ee waan karraa inaan sinno (soona celinno) farihiisa.

بَلَىٰ قَٰدِرِينَ عَلَىٰٓ أَن نُّسَوِّيَ بَنَانَهُۥ ﴿٤﴾

5. Wuxuuse dooni dadku inay ka gaaloobaan waxa ka horreeya.

بَلْ يُرِيدُ ٱلْإِنسَٰنُ لِيَفْجُرَ أَمَامَهُۥ ﴿٥﴾

6. Wuxuu waydiin waa goorma maalinta qiyaame.

يَسْـَٔلُ أَيَّانَ يَوْمُ ٱلْقِيَٰمَةِ ﴿٦﴾

7. Markase araggu wareero (taagmo).

فَإِذَا بَرِقَ ٱلْبَصَرُ ﴿٧﴾

8. Dayuxuna madoobaado.

وَخَسَفَ ٱلْقَمَرُ ﴿٨﴾

9. Lana kulmiyo qorraxda iyo dayaxa.

وَجُمِعَ ٱلشَّمْسُ وَٱلْقَمَرُ ﴿٩﴾

10. Wuxuu dhihi dadku maalintaas xagee loo cararaa.

يَقُولُ ٱلْإِنسَٰنُ يَوْمَئِذٍ أَيْنَ ٱلْمَفَرُّ ﴿١٠﴾

11. Saas ma aha ee ma jiro wax la magan galo (Alle mooyee).

كَلَّا لَا وَزَرَ ﴿١١﴾

12. Xaggaa Allehaa yaana maalintaas loo ahaan.

إِلَىٰ رَبِّكَ يَوْمَئِذٍ ٱلْمُسْتَقَرُّ ﴿١٢﴾

Suuraddan waxaa lagu magacaabaa suuratul-qiyaamah, waxayna ka warrami qiyaamada iyo sida Alle dadka u soo kulmin, iyo madax adaygga gaalada iyo siday u beenin abaalmarinta, maxayse u tari waxaa iman maalin araggu taagmi, dayuxuna madoobaan, qorraxdana uu la kulmi, dadkuna ay odhan iyagoo calaacali xaggee loo cararaa maanta, dhabtuse waxaan Alle ahayn oo la magan galo ma jiro maalintaas xaggiisaana loo ahaan. **[Al-Qiyaamah: 1-12].**

13. Waxaa looga warrami dadka maalintaas wuxuu hormarsaday iyo wuxuu dibmarsaday.

يُنَبَّؤُا۟ ٱلْإِنسَٰنُ يَوْمَئِذٍۭ بِمَا قَدَّمَ وَأَخَّرَ ﴿١٣﴾

14. Ruux walbana naftiisa isagaa ku maragfuri.

بَلِ ٱلْإِنسَٰنُ عَلَىٰ نَفْسِهِۦ بَصِيرَةٌ ﴿١٤﴾

15. Si kasta hadduu u cudurdaartana (wax uma tarto).

وَلَوْ أَلْقَىٰ مَعَاذِيرَهُۥ ﴿١٥﴾

16. Ha dhaqaajinnin Nabiyow carrabka inaad quraanka ku dagdagto (akhriskiisa).

لَا تُحَرِّكْ بِهِۦ لِسَانَكَ لِتَعْجَلَ بِهِۦٓ ﴿١٦﴾

17. Annagaa laabtaada ku kulmin kuuna akhriyi.

إِنَّ عَلَيْنَا جَمْعَهُۥ وَقُرْءَانَهُۥ ﴿١٧﴾

18. Ee markaan akhrinno raac akhriskiisa.

فَإِذَا قَرَأْنَٰهُ فَٱتَّبِعْ قُرْءَانَهُۥ ﴿١٨﴾

19. Annagaana isa saarray caddayntiisa.

ثُمَّ إِنَّ عَلَيْنَا بَيَانَهُۥ ﴿١٩﴾

20. Saas ma aha ee waxaad jeceshihiin dadow tan soo dagdagaysa (adduunyada).

كَلَّا بَلْ تُحِبُّونَ ٱلْعَاجِلَةَ ﴿٢٠﴾

21. Waxaadna ka tagaysaan aakhiro.

وَتَذَرُونَ ٱلْءَاخِرَةَ ﴿٢١﴾

22. Wajiyaal maalintaas way ifi.

وُجُوهٌ يَوْمَئِذٍ نَّاضِرَةٌ ﴿٢٢﴾

23. Rabbigeedna way eegi.

إِلَىٰ رَبِّهَا نَاظِرَةٌ ﴿٢٣﴾

24. Wajiyaalna maalintaas way kaduudsami.

وَوُجُوهٌ يَوْمَئِذٍۭ بَاسِرَةٌ ﴿٢٤﴾

25. Waxayna hubtaa in lugu fali balaayo.

تَظُنُّ أَن يُفْعَلَ بِهَا فَاقِرَةٌ ﴿٢٥﴾

Alle wax ka qarsoon ma jiro, cidwalbana wuxuu uga warrami wuxuu falay, ruux walbana isagaa naftiisa ku marag furi, wax cudurdaarana lagama aqbalo, Alle na wuxuu faray Nabigiisa inuusan ku dagdagin akhriska quraanka marka waxyigu ku dagayo, maxaa yeelay Alle ayaa ballan qaaday inuu quraanka kulmiyo Nabigana u akhriyo una caddeeyo, waxaase dhaba in dadku ka jeclaaday aakhiradiisa adduunyo (inta Alle doona mooyee), maalinta qiyaamana waxaa loo qaybsami cid faraxsan oo Alle arki, iyo cid naxsan oo balaayo sugi. (Xasan al-Bisri wuxuu yidhi Ilaahay bay fiirin, wayna mudataa inay ifto iyadoo Alle fiirin). **[Al-Qiyaamah: 13-25].**

26. Saas ma aha ee markay naftu gaadho dhuunta (waqtiga geerida).

كَلَّآ إِذَا بَلَغَتِ ٱلتَّرَاقِيَ ﴿٢٦﴾

27. Oo la dhoho yaa ku tufi.

وَقِيلَ مَنْۜ رَاقٍ ﴿٢٧﴾

28. Oo uu yaqiinsado inuu dhiman.

وَظَنَّ أَنَّهُ ٱلْفِرَاقُ ﴿٢٨﴾

29. Oo labada dhudhun isku marmaan (sakaraad dartiis).

وَٱلْتَفَّتِ ٱلسَّاقُ بِٱلسَّاقِ ﴿٢٩﴾

30. Allehaa xaggiisaa la aadi.

إِلَىٰ رَبِّكَ يَوْمَئِذٍ ٱلْمَسَاقُ ﴿٣٠﴾

31. Mase rumaynin gaalku xaqa mana tukannin.

فَلَا صَدَّقَ وَلَا صَلَّىٰ ﴿٣١﴾

32. Laakiin wuu beeniyay wuuna jeedsaday.

وَلَٰكِن كَذَّبَ وَتَوَلَّىٰ ﴿٣٢﴾

33. Wuxuuna aaday ehelkiisii isagoo kibirsan.

ثُمَّ ذَهَبَ إِلَىٰٓ أَهْلِهِۦ يَتَمَطَّىٰٓ ﴿٣٣﴾

34. Halaag buuse mutaa.

أَوْلَىٰ لَكَ فَأَوْلَىٰ ﴿٣٤﴾

35. Haddana halaag buu mutaa.

ثُمَّ أَوْلَىٰ لَكَ فَأَوْلَىٰٓ ﴿٣٥﴾

36. Ma wuxuu u maleeyay dadku in looga tagi bilaash (dan la'aan, oo aan la xisaabineyn).

أَيَحْسَبُ ٱلْإِنسَٰنُ أَن يُتْرَكَ سُدًى ﴿٣٦﴾

37. Miyuusan ahayn (billowgiisi) dhibic mani ah oo la dhibciyo.

أَلَمْ يَكُ نُطْفَةً مِّن مَّنِىٍّ يُمْنَىٰ ﴿٣٧﴾

ثُمَّ كَانَ عَلَقَةً فَخَلَقَ فَسَوَّىٰ ﴿٣٨﴾

38. Markaas noqota xinjir oo Alle abuuro ekeeyana.

فَجَعَلَ مِنْهُ ٱلزَّوْجَيْنِ ٱلذَّكَرَ وَٱلْأُنثَىٰٓ ﴿٣٩﴾

39. Kana yeelo labadii nooc lab iyo dhaddig.

أَلَيْسَ ذَٰلِكَ بِقَٰدِرٍ عَلَىٰٓ أَن يُحْۦِۦَ ٱلْمَوْتَىٰ ﴿٤٠﴾

40. Allaha saas kara miyuusan awoodin inuu soo nooleeyo wixii dhintay.

Geeridu waa xaq, waase arrin daran, wuxuuna Alle innooga warramay sakaraadka iyo dhibaatadiisa, iyo inaan qaraabo iyo cidna wax u tari karayn, Alle xaggiisana loo ahaan, taasoy waajib tahay in loo darbado, mase habboona in la maro waddadii Abii-Jahal iyo wixii la mid ahaa, een xaqa rumaynin cibaadana falin, balse beeniyay kana jeedsaday kibir iyo islawaynina ehelkiisa ugu dhexnoolaa, halaagbuuse mutaa. Miyuusanse dadku ogayn in waajib laga rabo iyo xaqoo la raaco iyagoo xusuusan waxa Alle ka abuuray iyo siduu u ekeeyay rag iyo haweenna ka dhigay, taasoo ku tusin awoodda Alle iyo inuu soo kulmin wixii dhintay si uu u abaal mariyo dhammaantood. **[Al-Qiyaamah: 26-40].**

Suurat Al-Insaan

سُورَةُ الْإِنسَانِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Dhab ahaan waxaa dadka soo maray waqti wax la sheego uusan ahayn (uusan jirin).

هَلْ أَتَىٰ عَلَى ٱلْإِنسَٰنِ حِينٌ مِّنَ ٱلدَّهْرِ لَمْ يَكُن شَيْـًٔا مَّذْكُورًا ﴿١﴾

2. Annagaa ka abuurray dadka dhibic isku dheehan, imtixaan dartiis, waxaanna ka yeellay wax maqle wax arka ah.

إِنَّا خَلَقْنَا ٱلْإِنسَٰنَ مِن نُّطْفَةٍ أَمْشَاجٍ نَّبْتَلِيهِ فَجَعَلْنَٰهُ سَمِيعًۢا بَصِيرًا ﴿٢﴾

3. Annagaa dadka tusinnay jidka, waxayna noqdeen mid shukriya (mahadiya) iyo mid gaalnimo badan.

إِنَّا هَدَيْنَٰهُ ٱلسَّبِيلَ إِمَّا شَاكِرًا وَإِمَّا كَفُورًا ﴿٣﴾

4. Annagaa u darabnay gaalada silsilado iyo katiinado iyo naarta saciira.

إِنَّآ أَعْتَدْنَا لِلْكَٰفِرِينَ سَلَٰسِلَا۠ وَأَغْلَٰلًا وَسَعِيرًا ﴿٤﴾

5. Kuwa baarriyiinta ah waxay ka cabbi weel buuxa oo lagu dheehay kaafuur.

إِنَّ ٱلْأَبْرَارَ يَشْرَبُونَ مِن كَأْسٍ كَانَ مِزَاجُهَا كَافُورًا ﴿٥﴾

6. Waa il ay ka cabbaan addoomada Alle, ayna u jiidaan say doonaan.

عَيْنًا يَشْرَبُ بِهَا عِبَادُ ٱللَّهِ يُفَجِّرُونَهَا تَفْجِيرًا ﴿٦﴾

7. Wayna oofiyaan nadarka, waxayna ka yaabi maalin sharkeedu fidi (qiyaamada).

يُوفُونَ بِٱلنَّذْرِ وَيَخَافُونَ يَوْمًا كَانَ شَرُّهُۥ مُسْتَطِيرًا ﴿٧﴾

8. Waxayna quudiyaan cuntada iyagoo cuntada jecel: miskiinka agoonka iyo kan xabbisan (ee dagaalka lagu qabtay).

وَيُطْعِمُونَ ٱلطَّعَامَ عَلَىٰ حُبِّهِۦ مِسْكِينًا وَيَتِيمًا وَأَسِيرًا ﴿٨﴾

9. Iyagoo dhihi waxaan idiin quudinnay dar Alle, mana idinka doonaynno abaalmarin iyo mahadnaq midna.

إِنَّمَا نُطْعِمُكُمْ لِوَجْهِ ٱللَّهِ لَا نُرِيدُ مِنكُمْ جَزَآءً وَلَا شُكُورًا ﴿٩﴾

Alle ayaa jiray isagoon wax kale joogin, isagaana hadhi markii la tago, waxaana dadka soo maray waqti ayna waxba ahayn, Alle ayaase abuuray si loo imtixaano kooda fiican iyo kan kale, jidka iyo wanaaggana wuu u caddeeyay, gaaladana caddibaad baa u sugnaatay, mu'miinta Alle adeecda ee ballankiisa oofisa, qiyaamadana ka yaabta, masaakiinta, agoonta iyo dadka dhibbanna quudiya dar Alle dartiis wuxuu u darbay janno iyo wanaag. Qataada wuxuu yidhi: sharku wuu fidi maalintaas wallaahiye intuu cirka iyo dhulka ka gaadho. **[Al-Insaan: 1-9].**

10. Waxaan ka yaabaynaa Rabbigeen maalin (wajigu) doorsoomi oo daran.

إِنَّا نَخَافُ مِن رَّبِّنَا يَوْمًا عَبُوسًا قَمْطَرِيرًا ﴿١٠﴾

11. Alle na waa ka dhawray sharka maalintaas, wuxuuna siiyay nuur iyo farax.

فَوَقَىٰهُمُ ٱللَّهُ شَرَّ ذَٰلِكَ ٱلْيَوْمِ وَلَقَّىٰهُمْ نَضْرَةً وَسُرُورًا ﴿١١﴾

12. Wuxuuna ku abaal mariyay samirkooda dartiis janno iyo xariir.

وَجَزَىٰهُم بِمَا صَبَرُوا۟ جَنَّةً وَحَرِيرًا ﴿١٢﴾

13. Waxayna ku dangiigsan sariiro sare, iyagoon ku arkayn qorrax iyo dhaxan midna.

مُّتَّكِـِٔينَ فِيهَا عَلَى ٱلْأَرَآئِكِ ۖ لَا يَرَوْنَ فِيهَا شَمْسًا وَلَا زَمْهَرِيرًا ﴿١٣﴾

14. Waxaana u dhaw hooska jannada, waxaana loo soo raariciyay midheheeda.

وَدَانِيَةً عَلَيْهِمْ ظِلَـٰلُهَا وَذُلِّلَتْ قُطُوفُهَا تَذْلِيلًا ﴿١٤﴾

15. Waxaa lala kor socon weelal fidda ah iyo koobab quruurado ah.

وَيُطَافُ عَلَيْهِم بِـَٔانِيَةٍ مِّن فِضَّةٍ وَأَكْوَابٍ كَانَتْ قَوَارِيرَا۠ ﴿١٥﴾

16. Quruuradahaas oo fidda ah si fiicanna u qiyaasan.

قَوَارِيرَاْ مِن فِضَّةٍ قَدَّرُوهَا تَقْدِيرًا ﴿١٦﴾

17. Waxaana laga waraabiyaa ehlu jannaha sharaab macaan oo lugu dheehay sinjibiil.

وَيُسْقَوْنَ فِيهَا كَأْسًا كَانَ مِزَاجُهَا زَنجَبِيلًا ﴿١٧﴾

18. Waana il lugu magacaabo salsabiil (ay ka cabbi).

عَيْنًا فِيهَا تُسَمَّىٰ سَلْسَبِيلًا ﴿١٨﴾

19. Waxaana u adeegi wiilal waari, haddaad aragtana aad u malayn jawhar la saydhay.

* وَيَطُوفُ عَلَيْهِمْ وِلْدَٰنٌ مُّخَلَّدُونَ إِذَا رَأَيْتَهُمْ حَسِبْتَهُمْ لُؤْلُؤًا مَّنثُورًا ﴿١٩﴾

Alle ciddii ka yaabta wuxuu ku abaal marin sharkoos ka dhawro iyo janno uu siiyo, iyagoon wax xun la kulmayn ay una shaqayn adeegayaal waari oo wiilal wanaagsan ku shaqayn iyagoo loo dhammeeyay nicmooyinka Alle aayadaha ku tilmaamay oy waajib tahay ruuxii caqli leh inuu higsado una darbado. Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: adduunyada waxa lagu sheegahayo iyo jannada waxaa kulmiya magaca. **[Al-Insaan: 10-19].**

20. Haddaad aragto halkaas waxaad arki nicmo iyo sharaf wayn.

وَإِذَا رَأَيْتَ ثَمَّ رَأَيْتَ نَعِيمًا وَمُلْكًا كَبِيرًا ﴿٢٠﴾

21. Dharkooduna (ehlu jannaha) waa xariir jilicsan oo cagaaran iyo xariir adagba, waxaana loo xidhi fidlo gacmaha la gashado, Alle na wuxuu ka waraabiyaa sharaab nadiif ah.

عَٰلِيَهُمْ ثِيَابُ سُندُسٍ خُضْرٌ وَإِسْتَبْرَقٌ ۖ وَحُلُّوٓاْ أَسَاوِرَ مِن فِضَّةٍ وَسَقَىٰهُمْ رَبُّهُمْ شَرَابًا طَهُورًا ﴿٢١﴾

22. Kaasi waa abaalmarintiinnii, falkiinniina wuxuu noqday mid la mahadiyay.

إِنَّ هَٰذَا كَانَ لَكُمْ جَزَآءً وَكَانَ سَعْيُكُم مَّشْكُورًا ﴿٢٢﴾

23. Annagaa quraanka Nabiyow kugu soo dajinnay.

إِنَّا نَحْنُ نَزَّلْنَا عَلَيْكَ ٱلْقُرْءَانَ تَنزِيلًا ﴿٢٣﴾

24. Ee ku samir xukunka Alle, hana maqlin dambiile iyo gaalnima badane (warkiis).

فَٱصْبِرْ لِحُكْمِ رَبِّكَ وَلَا تُطِعْ مِنْهُمْ ءَاثِمًا أَوْ كَفُورًا ﴿٢٤﴾

25. Xus magaca Alle subax iyo galabba.

وَٱذۡكُرِ ٱسۡمَ رَبِّكَ بُكۡرَةٗ وَأَصِيلٗا ٢٥

26. Habeenkana Alle u sujuud, una tasbiixso habeenkii (u tuko) waqti dheer.

وَمِنَ ٱلَّيۡلِ فَٱسۡجُدۡ لَهُۥ وَسَبِّحۡهُ لَيۡلٗا طَوِيلًا ٢٦

27. Kuwaasi waxay jecel yihiin tan soo dagdagaysa (adduunyada) waxay kaga tagayaan gadaashoodana maalin culus (qiyaamada).

إِنَّ هَٰٓؤُلَآءِ يُحِبُّونَ ٱلۡعَاجِلَةَ وَيَذَرُونَ وَرَآءَهُمۡ يَوۡمٗا ثَقِيلٗا ٢٧

28. Annagaa abuurray dadka, adkaynayna xubnohooda, haddaan doonnana waxaan ku baddalaynaa kuwa la mid ah.

نَّحۡنُ خَلَقۡنَٰهُمۡ وَشَدَدۡنَآ أَسۡرَهُمۡۖ وَإِذَا شِئۡنَا بَدَّلۡنَآ أَمۡثَٰلَهُمۡ تَبۡدِيلًا ٢٨

29. Suuraddani waa waano, ee ruuxii doona ha ka yeesho Alle xaggiisa waddo.

إِنَّ هَٰذِهِۦ تَذۡكِرَةٞۖ فَمَن شَآءَ ٱتَّخَذَ إِلَىٰ رَبِّهِۦ سَبِيلٗا ٢٩

30. Waxna ma dooni kartaan in Alle doona mooyee, Alle na waa wax walba oge falsan.

وَمَا تَشَآءُونَ إِلَّآ أَن يَشَآءَ ٱللَّهُۚ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَلِيمًا حَكِيمٗا ٣٠

31. Wuxuu galiyaa naxariistiisa ruuxuu doono, daalimiintana wuxuu u darbay cadaab daran.

يُدۡخِلُ مَن يَشَآءُ فِي رَحۡمَتِهِۦۚ وَٱلظَّٰلِمِينَ أَعَدَّ لَهُمۡ عَذَابًا أَلِيمَۢا ٣١

Jannada waxaa ku sugan waxaan ilu arag isagoo kale dhagna maqal qalbina ku soo dhici karin, waase in Allaha quraanka soo dajiyay la adeeco, dhibkana loo adkaysto, xumaanle warkiisana aan la maqal, adduunyana aan aakhara laga doorannin, si aan naxariista Alle u hello. **[Al-Insaan: 20-31].**

Suurat Al-Mursalaat

سُورَةُ ٱلْمُرْسَلَٰتِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaan ku dhaartay dabaysha wanaagga lala diro.
وَٱلْمُرْسَلَٰتِ عُرْفًا ﴿١﴾

2. Iyo dabaysha sida daran u dhabata.
فَٱلْعَٰصِفَٰتِ عَصْفًا ﴿٢﴾

3. Iyo dabaysha roobka kicisa.
وَٱلنَّٰشِرَٰتِ نَشْرًا ﴿٣﴾

4. Iyo malaa'igta xaqa iyo baadilka kala bixisa.
فَٱلْفَٰرِقَٰتِ فَرْقًا ﴿٤﴾

5. Iyo malaa'igta waxyiga soo dajisa.
فَٱلْمُلْقِيَٰتِ ذِكْرًا ﴿٥﴾

6. Si dadka loo waaniyo looguna digo.
عُذْرًا أَوْ نُذْرًا ﴿٦﴾

7. Ee waxa dadow Alle ku yaboohay wuu dhici.
إِنَّمَا تُوعَدُونَ لَوَٰقِعٌ ﴿٧﴾

8. Markase xiddiguhu nuurku ka tago.
فَإِذَا ٱلنُّجُومُ طُمِسَتْ ﴿٨﴾

9. Oo samadu dildillaacdo.
وَإِذَا ٱلسَّمَآءُ فُرِجَتْ ﴿٩﴾

10. Oo buuraha la rujiyo.
وَإِذَا ٱلْجِبَالُ نُسِفَتْ ﴿١٠﴾

11. Oo rasuulladii la kulmiyo (iyo dadkoodii).
وَإِذَا ٱلرُّسُلُ أُقِّتَتْ ﴿١١﴾

12. Maalintee loo dib dhigay.
لِأَىِّ يَوْمٍ أُجِّلَتْ ﴿١٢﴾

13. In dadka la kala bixiyo dartiis.
لِيَوْمِ ٱلْفَصْلِ ﴿١٣﴾

14. Maalinta kala bixinta ma taqaannaa.
وَمَآ أَدْرَىٰكَ مَا يَوْمُ ٱلْفَصْلِ ﴿١٤﴾

15. Halaag wuxuu u sugnaaday maalintaas kuwa xaqa beeniyay.

وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ﴿١٥﴾

Alle wuxuu rabuu ku dhaartaa oo ka mid ah khalqigiisa, halkanna wuxuu ku dhaartay shan arrimood in waxa lugu dhaaran ay shakila'aan tahay inuu dhici, kaasoo ah abaal-marinta qiyaame, waxaana ka horrayn waxyaalo waawayn sida xiddigahoo madoobaada, cirkoo duleeshama iyo buurahoo burbura, maalintaasna waxaa la kulmin rasuulladii iyo ummadohoodii. Mujaahidna wuxuu yidhi: waa maalinta la soo kulmin rasuullada si ay ugu marag kacaan ummadohoodii. **[Al-Mursalaat: 1-15].**

16. Miyaannaan halaagin ummadihii hore.

أَلَمْ نُهْلِكِ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿١٦﴾

17. Haddana aannaan raacinaynin kuwii dambe.

ثُمَّ نُتْبِعُهُمُ ٱلْآخِرِينَ ﴿١٧﴾

18. Saasaana ku falaynaa dambiilayaasha.

كَذَٰلِكَ نَفْعَلُ بِٱلْمُجْرِمِينَ ﴿١٨﴾

19. Halaagna wuxuu u sugnaaday maalintaas kuwa xaqa beeniya.

وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ﴿١٩﴾

20. Miyaannaan idinka abuurin biyo tabar yar (oo aan la qiimeyn).

أَلَمْ نَخْلُقكُّم مِّن مَّآءٍ مَّهِينٍ ﴿٢٠﴾

21. Markaasna yeellay meel ilaashan.

فَجَعَلْنَٰهُ فِى قَرَارٍ مَّكِينٍ ﴿٢١﴾

22. Tan iyo muddo la yaqaanno.

إِلَىٰ قَدَرٍ مَّعْلُومٍ ﴿٢٢﴾

23. Annagaa wax qaddarray, wax qaddarana u fiican.

فَقَدَرْنَا فَنِعْمَ ٱلْقَٰدِرُونَ ﴿٢٣﴾

24. Halaagna wuxuu u sugnaaday maalintaas kuwa xaqa beeniyay.

وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ﴿٢٤﴾

25. Miyaannaan ka yeelin dhulka ku wax duma ama weel.

أَلَمْ نَجْعَلِ ٱلْأَرْضَ كِفَاتًا ﴿٢٥﴾

26. Nolol iyo geeriba.

أَحْيَآءً وَأَمْوَٰتًا ﴿٢٦﴾

27. Waxaanna yeellay dhulka dhexdiisa buuro sugan oo waawayn, waxaanna idinka waraabinnay biyo macaan.

وَجَعَلْنَا فِيهَا رَوَٰسِىَ شَٰمِخَٰتٍ
وَأَسْقَيْنَٰكُم مَّآءً فُرَاتًا ﴿٢٧﴾

28. Halaagna wuxuu u sugnaaday maalintaas kuwa xaqa beeniyay.

وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ﴿٢٨﴾

Alle wuxuu inooga digay wixii ku dhacay ummadihii hore, isagoo ina xusuusin waxa laynaga abuuray iyo siduu noo abuuray, iyo siduu dhulka inoogu sahlay looguna dul noolaan looguna dhiman, buurana ugu sugay biyo macaanna inooga waraabiyay. Culimada quraanka fasirtayna waxay dheheen: Alle wuxuu ku celceliyay suuraddan (halaag wuxuu u sugnaaday kuwa xaqa beeniyay) toban jeer si loo badiyo doonidda iyo cabsida. **[Al-Mursalaat: 16-28].**

29. Aada gaalooy cadaabkii xaggiisa aad beenin jirteen.

ٱنطَلِقُوٓاْ إِلَىٰ مَا كُنتُم بِهِۦ تُكَذِّبُونَ ﴿٢٩﴾

30. Aada hoos (qiiqa naarta) oo saddex madax ah.

ٱنطَلِقُوٓاْ إِلَىٰ ظِلٍّ ذِى ثَلَٰثِ شُعَبٍ ﴿٣٠﴾

31. Oon hoosinayn, ololla (kulaylna) wax ka tarayn.

لَّا ظَلِيلٍ وَلَا يُغْنِى مِنَ ٱللَّهَبِ ﴿٣١﴾

32. Waxayna naartu tuuri dhimbilo daran ood mooddo daar.

إِنَّهَا تَرْمِى بِشَرَرٍ كَٱلْقَصْرِ ﴿٣٢﴾

33. Ama aad mooddo geel madaw ah.

كَأَنَّهُۥ جِمَٰلَتٌ صُفْرٌ ﴿٣٣﴾

34. Halaagna wuxuu u sugnaaday maalintaas kuwa xaqa beeniyay.

وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ﴿٣٤﴾

35. Taasina waa maalin aynan hadlaynin dadku.

هَٰذَا يَوْمُ لَا يَنطِقُونَ ﴿٣٥﴾

36. Lamana idmo si ay u cudurdaartaan.

وَلَا يُؤْذَنُ لَهُمْ فَيَعْتَذِرُونَ ﴿٣٦﴾

37. Halaagna wuxuu u sugnaaday maalintaas kuwa xaqa beeniyay.

وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ﴿٣٧﴾

38. Maalintan waa maalintii kala bixinta, waana idin kulminnay idinka iyo kuwii horreeyayba.

هَٰذَا يَوْمُ ٱلْفَصْلِ ۖ جَمَعْنَٰكُمْ وَٱلْأَوَّلِينَ ﴿٣٨﴾

39. Ee haddaad wax dhagri kartaan i dhagra.

فَإِن كَانَ لَكُمْ كَيْدٌ فَكِيدُونِ ﴿٣٩﴾

40. Halaagna wuxuu u sugnaaday maalintaas kuwa xaqa beeniyay.

وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ﴿٤٠﴾

Alle cidna ma dulmiyo qiyaamana waxaa lagu abaalmarin xaq-diidayaasha caddibaad daran, iyadoon cidna hadli karin ruux Alle idma mooyeen, iyadoo dadkoo dhan la kulmin. Dabarina wuxuu yidhi: hooska naartu kulaylkeedana kama hadheeyo, ololkeedana kama dugsiiyo. **[Al-Mursalaat: 29-40].**

إِنَّ ٱلْمُتَّقِينَ فِى ظِلَٰلٍ وَعُيُونٍ ﴿٤١﴾

41. Kuwa Alle ka dhawrsada waxay ku sugnaan hoos iyo ilo.

وَفَوَٰكِهَ مِمَّا يَشْتَهُونَ ﴿٤٢﴾

42. (Waxayna cuni) khudaartay (mirahay) doonaan.

كُلُوا۟ وَٱشْرَبُوا۟ هَنِيٓـًٔۢا بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٤٣﴾

43. Waxaana lagu dhihi cuna oo cabba idinkoo shifaysan camalkiinnii dartiis.

إِنَّا كَذَٰلِكَ نَجْزِى ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿٤٤﴾

44. Sasaanna ku abaal marinaynaa kuwa wanaagga fala.

وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ﴿٤٥﴾

45. Halaagna wuxuu u sugnaaday kuwa xaqa beeniya.

كُلُوا۟ وَتَمَتَّعُوا۟ قَلِيلًا إِنَّكُم مُّجْرِمُونَ ﴿٤٦﴾

46. (Gaalada waxaa lagu dhihi) cuna oo raaxaysta wax yar, waxaad tihiin dambiilayaale.

وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ﴿٤٧﴾

47. Halaagna wuxuu u sugnaaday maalintaas kuwa xaqa beeniyay.

وَإِذَا قِيلَ لَهُمُ ٱرْكَعُوا۟ لَا يَرْكَعُونَ ﴿٤٨﴾

48. Markii la yidhaahdo gaalada tukada ma tukadaan.

وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ﴿٤٩﴾

49. Halaagna wuxuu u sugnaaday maalintaas kuwa xaqa beeniyay.

فَبِأَىِّ حَدِيثٍۭ بَعْدَهُۥ يُؤْمِنُونَ ﴿٥٠﴾

50. Hadalkeebay quraanka dabadiis rumaynayaan.

Ruux walba wuxuu la kulmi wuxuu hormarsaday, wuxuuna goosan midhuhuu abuurtay, mu'miniintuna waxay ku sugnaan maalintaas qiyaame hoos, iyo biyo dureeri, iyo nicmo badan, siday gaaladuba ugu sugan tahay naar daran iyo oon iyo kadeedba, maxaa yeelay wanaaggoodii adduunyadii bay ku soo hormarsadeen, waxaase la yaable oo isawaydiis leh ruuxii quraankan rumayn waaya waxa kalees rumayn. Muqaatil wuxuu sheegay: inay ku soo dagtay aayadda (haddii loo yidhaahdo tukada ma tukadaan) reer Thaqiif, oo Nabiga ka codsaday in salaadda laga daayo, Nabiguna uu diiday naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee oo uu yidhi: khayr ma leh diin aan salaad lahayn, taasina waxay ku tusin salaadda iyo islaamnimadu inay isku xidhan yihiin. **[Al-Mursalaat: 41-50].**

Suurat An-Naba'

سُورَةُ النَّبَإِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Maxay iska waydiinayaan (gaaladu).

عَمَّ يَتَسَآءَلُونَ ﴿١﴾

2. Warkii waynaa xaggiisa (quraanka qiyaamada ka warrami).

عَنِ ٱلنَّبَإِ ٱلْعَظِيمِ ﴿٢﴾

3. Ay isku diiddanaayeen.

ٱلَّذِى هُمْ فِيهِ مُخْتَلِفُونَ ﴿٣﴾

4. Saas ma aha ee way ogaan doonaan.

كَلَّا سَيَعْلَمُونَ ﴿٤﴾

5. Haddana way ogaan doonaan (waxa ku dhaca).

ثُمَّ كَلَّا سَيَعْلَمُونَ ﴿٥﴾

6. Miyaannaan dhulka gogol ka yeelin.

أَلَمْ نَجْعَلِ ٱلْأَرْضَ مِهَٰدًا ﴿٦﴾

7. Buurahana rukummo (ka yeelin).

وَٱلْجِبَالَ أَوْتَادًا ﴿٧﴾

8. Miyannaan idin abuurin idinkoo noocyo ah (lab iyo dheddig).

وَخَلَقْنَٰكُمْ أَزْوَٰجًا ﴿٨﴾

9. Miyaannaan hurdada raaxo idiinka dhigin.

وَجَعَلْنَا نَوْمَكُمْ سُبَاتًا ﴿٩﴾

10. Miyaannaan habeenka asturaad idiinka dhigin.

وَجَعَلْنَا ٱلَّيْلَ لِبَاسًا ﴿١٠﴾

11. Miyaannaan maalinta waqti shaqo idiinka dhigin.

وَجَعَلْنَا ٱلنَّهَارَ مَعَاشًا ﴿١١﴾

12. Korkiinna miyaannaan ka dhisin toddoba xoog leh.

وَبَنَيْنَا فَوْقَكُمْ سَبْعًا شِدَادًا ﴿١٢﴾

13. Miyaannaan dhexdeeda yeelin siraad aad u ifi (qorraxda).

وَجَعَلْنَا سِرَاجًا وَهَّاجًا ﴿١٣﴾

Aayadahani waxay caddayn canaanta ku dhici kuwa quraanka, qiyaamada iyo xaqa ka shakiya, Alle na wuu u goodiyay, maxaa yeelay nicmooyinkiisa yay u jeedaan, sida dhulka, buuraha, abuurka, hurdada raaxada ah, habeenka, maalinta, cirka iyo iftiinka Alle inoo yeelay, Allaha ahaysiiyay waxyaalahaas iyo nicmooyin kale oo badanba ma mudna in laga gaaloobo, ee wuxuu mudan yahay rumayn iyo addeecid. **[An-Naba': 1-13].**

14. Waxaan idiinka soo dajinnay daruuraha biyo badan.

وَأَنزَلْنَا مِنَ ٱلْمُعْصِرَٰتِ مَآءً ثَجَّاجًا ﴿١٤﴾

15. Si aan ugu soo bixinno midho iyo daaq.

لِّنُخْرِجَ بِهِۦ حَبًّا وَنَبَاتًا ﴿١٥﴾

16. Iyo beero kulansan (oo geedaheedu is dhex gashan yihiin).

وَجَنَّٰتٍ أَلْفَافًا ﴿١٦﴾

17. Maalinta kala buxu waxay leedahay waqti go'an.

إِنَّ يَوْمَ ٱلْفَصْلِ كَانَ مِيقَٰتًا ﴿١٧﴾

18. Waana maalinta suurka la afuufi ood u imanaysaan kooxo.

يَوْمَ يُنفَخُ فِى ٱلصُّورِ فَتَأْتُونَ أَفْوَاجًا ﴿١٨﴾

19. Samadana waa la furi waxayna yeelan albaabbo.

وَفُتِحَتِ ٱلسَّمَآءُ فَكَانَتْ أَبْوَٰبًا ﴿١٩﴾

20. Buurahana waa la kaxayn (oo ay baabi'i) waxayna noqon dhalanteed.

وَسُيِّرَتِ ٱلْجِبَالُ فَكَانَتْ سَرَابًا ﴿٢٠﴾

21. Naarta jahannamana waxay u darban tahay.

إِنَّ جَهَنَّمَ كَانَتْ مِرْصَادًا ﴿٢١﴾

22. (Gaalada) xadgudbay meelay u noqon.

لِّلطَّٰغِينَ مَـَٔابًا ﴿٢٢﴾

23. Waxayna ku nagaan dhexdeeda sanooyin (aan dhammaad lahayn).

لَّٰبِثِينَ فِيهَآ أَحْقَابًا ﴿٢٣﴾

24. Mana ku dhadhamiyaan dhexdeeda qabaw (ama hurdo) ama cabbid midna.

لَّا يَذُوقُونَ فِيهَا بَرْدًا وَلَا شَرَابًا ﴿٢٤﴾

25. Waxaan ahayn biyo kulul iyo dhacaanka (ehlu naarka).

إِلَّا حَمِيمًا وَغَسَّاقًا ﴿٢٥﴾

26. Waxaana lagu abaalmariyay si waafaqsan camalkoodii.

جَزَآءً وِفَاقًا ﴿٢٦﴾

27. Waxayna ahaayeen kuwa aan ka yaabaynin xisaab.

إِنَّهُمْ كَانُوا۟ لَا يَرْجُونَ حِسَابًا ﴿٢٧﴾

Deeqda Alle waxay mudan tahay in lugu mahadiyo, maxaa yeelay waxaa dambeeya qiyaame, xisaab, abaalmarin iyo ciqaab kuwa xadgudba een Alle ka yaabin, waxayna ku waari naar daran oon wax wanaagsan oo la cabbo iyo hurdo iyo raaxo midna lahayn, Alle na cidna ma dulmiyo, ee iyagaa is dulmiyay. Qataada wuxuu yidhi: (nagaanshaha sanooyinka) waa waxaan dhammaanaynin, markuu mid tagaba midbaa iman. **[An. Naba': 14-27].**

28. Waxayna beeniyeen aayaadkannaga beenin.

وَكَذَّبُوا۟ بِـَٔايَـٰتِنَا كِذَّابًا ﴿٢٨﴾

29. Wax walbana waxaan ku koobnay kitaab (looxul-maxfuud, malaa'igtuna way qortay).

وَكُلَّ شَىْءٍ أَحْصَيْنَـٰهُ كِتَـٰبًا ﴿٢٩﴾

30. Ee dhadhamiya caddibaad gaalooy waxaan caddibaad ahayn idiin kordhin maynee.

فَذُوقُوا۟ فَلَن نَّزِيدَكُمْ إِلَّا عَذَابًا ﴿٣٠﴾

31. Kuwa Alle ka dhawrsada waxay leeyihiin liibaan.

إِنَّ لِلْمُتَّقِينَ مَفَازًا ﴿٣١﴾

32. Beero iyo cinabyana way heli.

حَدَآئِقَ وَأَعْنَـٰبًا ﴿٣٢﴾

33. Waxayna guursan haween da'yar oo isle eg.

وَكَوَاعِبَ أَتْرَابًا ﴿٣٣﴾

34. Waxayna heli weel khamreed buuxa.

وَكَأْسًا دِهَاقًا ﴿٣٤﴾

35. Jannada kuma dhex maqlaan hadal macna la'aan ah iyo is beenin midna.

لَّا يَسْمَعُونَ فِيهَا لَغْوًا وَلَا كِذَّٰبًا ﴿٣٥﴾

جَزَآءً مِّن رَّبِّكَ عَطَآءً حِسَابًا ﴿٣٦﴾

36. Waa abaalmarin Alle uu siiyay oo ku filan.

رَّبِّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا ٱلرَّحْمَٰنِ ۖ لَا يَمْلِكُونَ مِنْهُ خِطَابًا ﴿٣٧﴾

37. Ahna Rabbiga samada iyo dhulka iyo waxa u dhexeeya, Allaha Raxmaan ah, hadal wax ku soo celinna ma jiro (qiyaamada).

يَوْمَ يَقُومُ ٱلرُّوحُ وَٱلْمَلَٰٓئِكَةُ صَفًّا ۖ لَّا يَتَكَلَّمُونَ إِلَّا مَنْ أَذِنَ لَهُ ٱلرَّحْمَٰنُ وَقَالَ صَوَابًا ﴿٣٨﴾

38. Maalinta Jibriil iyo malaa'igtu saf istaagi wax hadli ma jiro ruux Alle idmo mooyee oo hadal xaq ah ku hadla.

ذَٰلِكَ ٱلْيَوْمُ ٱلْحَقُّ ۖ فَمَن شَآءَ ٱتَّخَذَ إِلَىٰ رَبِّهِۦ مَـَٔابًا ﴿٣٩﴾

39. Maalintaasi waa sugan tahay ee ruuxii doona Alle xaggiisa meeluu ku noqdo ha ka samaysto.

إِنَّآ أَنذَرْنَٰكُمْ عَذَابًا قَرِيبًا يَوْمَ يَنظُرُ ٱلْمَرْءُ مَا قَدَّمَتْ يَدَاهُ وَيَقُولُ ٱلْكَافِرُ يَٰلَيْتَنِى كُنتُ تُرَٰبًۢا ﴿٤٠﴾

40. Waxaannu idiinka digaynaa caddibaad dhaw maalinta uu arki ruux walba waxay gacmihiisu hor marsadeen, gaalkuna uu dhihi shallaytadaydee maan carro noqdo.

Alle wuxuu ku dhaartay malaa'igta siduu wax badan khalqigiisa ugu dhaartay in qiyaamadu tahay wax sugan ruuxii rumeeyana ee xaqa raaca uu ugu abaal-mariyo janno iyo wanaag. Maalinta qiyaame iyo dhibaatadeedana waa in ruuxii caqli leh u darbadaa, illeen waa maalin xaq ah, ruux walbana wuu arki wuxuu hor marsaday, calaacalna uusan wax taraynin ee camal wax taro. **[An-Naba': 28-40].**

Suurat An-Naazicaat

سُورَةُ النَّازِعَاتِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

وَٱلنَّٰزِعَٰتِ غَرْقًا ﴿١﴾

1. Alle wuxuu ku dhaartay malaa'igta nafta si daran uga siibta (gaalada).

وَٱلنَّٰشِطَٰتِ نَشْطًا ﴿٢﴾

2. Iyo tan si fudud uga qaadda (mu'miniinta).

وَٱلسَّٰبِحَٰتِ سَبْحًا ﴿٣﴾

3. Iyo malaa'igta hawada dabbaalata (si amar fulin ah).

فَٱلسَّٰبِقَٰتِ سَبْقًا ﴿٤﴾

4. Iyo tan u orotanta wanaagga.

فَٱلْمُدَبِّرَٰتِ أَمْرًا ﴿٥﴾

5. Iyo kuwa maamula amarka (Alle).

يَوْمَ تَرْجُفُ ٱلرَّاجِفَةُ ﴿٦﴾

6. Maalinta ay gilgilan (arlada iyo buuruhu) afuufka (hore).

تَتْبَعُهَا ٱلرَّادِفَةُ ﴿٧﴾

7. Oyna raaci tii dambe (waa sugan tahay).

قُلُوبٌ يَوْمَئِذٍ وَاجِفَةٌ ﴿٨﴾

8. Qalbiyaduna maalintaa way cabsan.

أَبْصَٰرُهَا خَٰشِعَةٌ ﴿٩﴾

9. Araggeeduna wuu dullaysnaan.

يَقُولُونَ أَءِنَّا لَمَرْدُودُونَ فِى ٱلْحَافِرَةِ ﴿١٠﴾

10. Waxayna dhihi (gaaladu) ma raadkiibaa naloo celin (oo adduunkii ah).

أَءِذَا كُنَّا عِظَٰمًا نَّخِرَةً ﴿١١﴾

11. Markaan noqonno lafo duugoobay.

12. Waxay dheheen taasi waa noqosho khasaara ah.
قَالُوا۟ تِلْكَ إِذًا كَرَّةٌ خَاسِرَةٌ ﴿١٢﴾

13. Waa uun hal qaylo kaliya.
فَإِنَّمَا هِىَ زَجْرَةٌ وَٰحِدَةٌ ﴿١٣﴾

14. Dadkuna markaas ay dhulka kor iman.
فَإِذَا هُم بِٱلسَّاهِرَةِ ﴿١٤﴾

Alle wuxuu ku dhaartay malaa'igta siduu wax badan khalqigiisa ugu dhaartay in qiyaamadu wax sugan tahay dhibaatana leedahay Alle cid uu ka koriyo mooyee, dadkana waa la soo kulmin si loo abaalmariyo, Allaha abuuriddoodii karayna kama daalo in uu soo bixiyo wayna u fududdahay. Tirmidi wuxuu wariyay: in Rasuulkii Alle naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha yeelee markuu tago habeenka saddex meelood oo laba meel uu istaagi jiray, wuxuuna dhihi jiray: «dadoow xusa Alle, afuufiddii hore timid tii dambena way raaci, geerina timid iyo wixii ku dhex sugan». **[An-Naazicaat: 1-14].**

15. Ma ku soo gaadhay warkii (Nabi) Muuse.
هَلْ أَتَىٰكَ حَدِيثُ مُوسَىٰٓ ﴿١٥﴾

16. Markii Alle uga yeedhay toggii barakaysnaa ee dhuwaa.
إِذْ نَادَىٰهُ رَبُّهُۥ بِٱلْوَادِ ٱلْمُقَدَّسِ طُوًى ﴿١٦﴾

17. Kuna yidhi u tag fircoon wuu xadgudbaye.
ٱذْهَبْ إِلَىٰ فِرْعَوْنَ إِنَّهُۥ طَغَىٰ ﴿١٧﴾

18. Oo ku dheh ma rabtaa inaad daahir noqotid.
فَقُلْ هَل لَّكَ إِلَىٰٓ أَن تَزَكَّىٰ ﴿١٨﴾

19. Oon Alle jidkiisa kugu hanuuniyo kana yaabtid.
وَأَهْدِيَكَ إِلَىٰ رَبِّكَ فَتَخْشَىٰ ﴿١٩﴾

20. Wuxuuna (Nabi-muuse) tusiyay fircoon aayad wayn.
فَأَرَىٰهُ ٱلْءَايَةَ ٱلْكُبْرَىٰ ﴿٢٠﴾

21. Fircoonna wuu beeniyay oo caasiyay.
فَكَذَّبَ وَعَصَىٰ ﴿٢١﴾

22. Wuuna jeedsaday isagoo xumaan la socda.
ثُمَّ أَدْبَرَ يَسْعَىٰ ﴿٢٢﴾

23. Wuxuuna kulmiyay (askartii) una qaylyay.
فَحَشَرَ فَنَادَىٰ ﴿٢٣﴾

24. Isagoo dhihi waxaan ahay Allihiinna sare.
فَقَالَ أَنَا۠ رَبُّكُمُ ٱلْأَعْلَىٰ ﴿٢٤﴾

25. Markaasaa Alle ciqaabay aakhiro iyo adduunba.
فَأَخَذَهُ ٱللَّهُ نَكَالَ ٱلْآخِرَةِ وَٱلْأُولَىٰٓ ﴿٢٥﴾

26. Arrintaasna waano yaa ugu sugan ruuxii Alle ka yaabi.
إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَعِبْرَةً لِّمَن يَخْشَىٰٓ ﴿٢٦﴾

Nabi Muuse wuxuu Alle faray inuu dadkii masar dagganaa xaqa ugu yeedho hase yeeshee Fircoon oo xukunka haystay yaa ka hor joogsaday, uguna yeedhay inay isaga addeecaan, mar hadduu awoodda sare isagu leeyahay, ugu dambayntiise Fircoon iyo colkiisiiba waa la halaagay waxaana dhulkii u hadhay Nabi Muuse iyo intii la jirtay ee xaqa rumaysay, taasina waxay ku tusin in xumaantu tagi xaquna hadhi. **[An-Naazicaat: 15-26].**

27. Ma idinkaa daran abuuridda mase samada, Alle ayaa dhisay.
ءَأَنتُمْ أَشَدُّ خَلْقًا أَمِ ٱلسَّمَآءُ ۚ بَنَىٰهَا ﴿٢٧﴾

28. Korna yeelay jurmigeeda ekeeyayna.
رَفَعَ سَمْكَهَا فَسَوَّىٰهَا ﴿٢٨﴾

29. Habeenkeedana madoobeeyay maalinteedana soo bixiyay (oo ifiyay).
وَأَغْطَشَ لَيْلَهَا وَأَخْرَجَ ضُحَىٰهَا ﴿٢٩﴾

30. Dhulkana markaas ka dib fidiyay.
وَٱلْأَرْضَ بَعْدَ ذَٰلِكَ دَحَىٰهَآ ﴿٣٠﴾

31. Biyahiisa iyo daaqiisana soo bixiyay.
أَخْرَجَ مِنْهَا مَآءَهَا وَمَرْعَىٰهَا ﴿٣١﴾

32. Buurahana sugay.
وَٱلْجِبَالَ أَرْسَىٰهَا ﴿٣٢﴾

33. Si aad idinka iyo xoolihiinnu ugu nacfidaan.
مَتَٰعًا لَّكُمْ وَلِأَنْعَٰمِكُمْ ﴿٣٣﴾

34. Markay timaaddo musiibadii waynayd (ee qiyaamadu).
فَإِذَا جَآءَتِ ٱلطَّآمَّةُ ٱلْكُبْرَىٰ ﴿٣٤﴾

35. Maalintaas dadku way xusuusan waxay faleen.
يَوْمَ يَتَذَكَّرُ ٱلْإِنسَٰنُ مَا سَعَىٰ ﴿٣٥﴾

36. Naarta jaxiimana waxaa loo muujin ruuxii arki.
وَبُرِّزَتِ ٱلْجَحِيمُ لِمَن يَرَىٰ ﴿٣٦﴾

37. Ruuxiise xadgudba.
فَأَمَّا مَن طَغَىٰ ﴿٣٧﴾

38. Nolosha adduunyana doorta.
وَءَاثَرَ ٱلْحَيَوٰةَ ٱلدُّنْيَا ﴿٣٨﴾

39. Jaxiima ayaa hoy u ah.

فَإِنَّ ٱلْجَحِيمَ هِىَ ٱلْمَأْوَىٰ ﴿٣٩﴾

40. Ruuxiise ka yaaba horjoogsigiisa Alle (la kulan kiisa), naftana ka reeba hawada (xun).

وَأَمَّا مَنْ خَافَ مَقَامَ رَبِّهِۦ وَنَهَى ٱلنَّفْسَ عَنِ ٱلْهَوَىٰ ﴿٤٠﴾

41. Jannada ayaa hoy u ah.

فَإِنَّ ٱلْجَنَّةَ هِىَ ٱلْمَأْوَىٰ ﴿٤١﴾

42. Waxay ku waydiin saacadda (qiyaamaha) markay sugnaan.

يَسْـَٔلُونَكَ عَنِ ٱلسَّاعَةِ أَيَّانَ مُرْسَىٰهَا ﴿٤٢﴾

43. Maxaa ku ogaysiiyay waqtigeeda.

فِيمَ أَنتَ مِن ذِكْرَىٰهَآ ﴿٤٣﴾

44. Alle umbuu ku dhammaan ogaansheheedu.

إِلَىٰ رَبِّكَ مُنتَهَىٰهَآ ﴿٤٤﴾

45. Adugu waxaad tahay uun u digaha ruuxii ka yaabi.

إِنَّمَآ أَنتَ مُنذِرُ مَن يَخْشَىٰهَا ﴿٤٥﴾

46. Waxay la mid noqon maalintay arkaan (qiyaamada) iyagoon ku nagaannin (adduunka) galab iyo barqin mooyeen.

كَأَنَّهُمْ يَوْمَ يَرَوْنَهَا لَمْ يَلْبَثُوٓاْ إِلَّا عَشِيَّةً أَوْ ضُحَىٰهَا ﴿٤٦﴾

Isagoo Alle u nicmeeyay yaa haddana dadku xaqa beenin iyo qiyaamadaba, markase dhabtu timaaddo Alle na la hor yimaaddo waxaa la kala aadi laba waddo, jaxiima iyo janno, qiyaamadu markay dhicina Alle ayaa ku cilmi leh, mase aha wax la dadajisto, waxaase wax tari in wanaag la hormarsado, raaxa adduun iyo ku raagiddiisuba waa wax yar. Qataada wuxuu yidhi: adduunyadu way la yaraan dadka markay aakharo arkaan. **[An-Naazicaat: 27-46].**

Suurat Cabasa

سُورَةُ عَبَسَ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Wajiguu u uruuriyay oo jeedsaday (Nabigu).

عَبَسَ وَتَوَلَّىٰٓ ١

2. Inuu u yimid kii indhaha la'aa.

أَن جَآءَهُ ٱلْأَعْمَىٰ ٢

3. Miyaad ogtahay inay u dhawdahay inuu hanuuno oo daahir noqdo.

وَمَا يُدْرِيكَ لَعَلَّهُۥ يَزَّكَّىٰٓ ٣

4. Ama uu xusuusto oy xusuustu anfacdo.

أَوْ يَذَّكَّرُ فَتَنفَعَهُ ٱلذِّكْرَىٰٓ ٤

5. Ruuxiise is deeqtoonaysiiya (islana waynaada).

أَمَّا مَنِ ٱسْتَغْنَىٰ ٥

6. Waa aad u bambixi.

فَأَنتَ لَهُۥ تَصَدَّىٰ ٦

7. Maxaa kaa saaran hadduusan hanuunin.

وَمَا عَلَيْكَ أَلَّا يَزَّكَّىٰ ٧

8. Ruuxiise kuu yimaadda isagoo dagdagi.

وَأَمَّا مَن جَآءَكَ يَسْعَىٰ ٨

9. Oo Alle ka yaabi.

وَهُوَ يَخْشَىٰ ٩

10. Waad ka shuqloomi.

فَأَنتَ عَنْهُ تَلَهَّىٰ ١٠

11. Saas ma aha ee aayadahani waa waano.

كَلَّآ إِنَّهَا تَذْكِرَةٌ ١١

12. Ruuxii doonana wuu ku waana qaadan.

فَمَن شَآءَ ذَكَرَهُۥ ١٢

Suuraddani waxay ku soo dagtay mar Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) uu ku shuqloonaa qaar ka mid ah gaaladii qureesheed ee makaad si uu ugu sharxo diinta islaamka ah markaasaa waxaa u yimid nin indha la'aa la dhihi jirayna Cabdullaahi ibnu Ummi Maktuum, wuxuuna ku celceliyay Nabiga hadalka, hase yeeshee Nabigu wuxuu wali ku shuqloonaa hanuuninta gaaladaas, markaasaa Alle suuraddan soo dajiyay, Nabiguna had iyo jeer wuxuu soo dhaweyn jiray saxaabigaa la soo sheegay isagoo dhihi jiray: soo dhawow kii Alle igu dagaalayow, taasina waxay ku tusin caddaaladda iyo sinnaanta islaamka, Alle na cidduu doono wuu hanuunin. **[Cabasa: 1-12].**

13. Waxay ku sugan tahay (waanadu) kutub sharaf leh.	فِي صُحُفٍ مُّكَرَّمَةٍ ﴿١٣﴾
14. Oo la kor yeelay lana daahiriyay.	مَّرْفُوعَةٍ مُّطَهَّرَةٍ ﴿١٤﴾
15. Oy gacanta ku hayaan malaa'ig (wax qorta).	بِأَيْدِى سَفَرَةٍ ﴿١٥﴾
16. Sharafna leh oo baarri ah.	كِرَامٍ بَرَرَةٍ ﴿١٦﴾
17. Gaalo halla lacnado gaalnima badanaa.	قُتِلَ ٱلْإِنسَٰنُ مَآ أَكْفَرَهُۥ ﴿١٧﴾
18. Muxuu Alle ka abuuray kuwaas.	مِنْ أَىِّ شَىْءٍ خَلَقَهُۥ ﴿١٨﴾
19. Dhibic buu ka abuuray wuuna ekeeyay.	مِن نُّطْفَةٍ خَلَقَهُۥ فَقَدَّرَهُۥ ﴿١٩﴾
20. Jidkana (ka soo bixidda caloosha hooyadii) wuu u fudaydiyay.	ثُمَّ ٱلسَّبِيلَ يَسَّرَهُۥ ﴿٢٠﴾
21. Markaasuu dilaa qabrina ku asturaa.	ثُمَّ أَمَاتَهُۥ فَأَقْبَرَهُۥ ﴿٢١﴾
22. Markuu doonana wuu soo bixin.	ثُمَّ إِذَا شَآءَ أَنشَرَهُۥ ﴿٢٢﴾
23. Saas ma aha (ee qofku) wixii la faray ma yeelin.	كَلَّا لَمَّا يَقْضِ مَآ أَمَرَهُۥ ﴿٢٣﴾

Kutubta Alle iyo waxyigiisaba waxaa maamula malaa'ig sharaf leh oo daahir ah. Gaalase ma oggolaato xaqa kibir iyo isla wayni dartiis. Iyagoo garan waxa Alle dadka ka abuuray iyo siduu ugu samafalay, dadse ma falin wixii Alle faray. Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: jidkaa loo sahlay waa ka soo bixiddi uurka hooyo, Cikrimana saasuu qabaa iyo Ibnu-jariir. Labada jid yaa loo kala caddeeyayna waa la dhahaa. Mujaahidna wuxuu yidhi: ruuxna ma wada falo wixii Alle wada faray. **[Cabasa: 13-23].**

24. Qofku ha fiiriyo cuntadiisa. فَلْيَنظُرِ ٱلْإِنسَٰنُ إِلَىٰ طَعَامِهِۦٓ ﴿٢٤﴾

25. Inaan roob ku soo shubno shubid. أَنَّا صَبَبْنَا ٱلْمَآءَ صَبًّا ﴿٢٥﴾

26. Dhulkana markaas aan jeexno jeexid. ثُمَّ شَقَقْنَا ٱلْأَرْضَ شَقًّا ﴿٢٦﴾

27. Kana soo bixinno badar. فَأَنۢبَتْنَا فِيهَا حَبًّا ﴿٢٧﴾

28. Iyo cinab iyo daaqa (xoolaha). وَعِنَبًا وَقَضْبًا ﴿٢٨﴾

29. Iyo zaytuun iyo timir. وَزَيْتُونًا وَنَخْلًا ﴿٢٩﴾

30. Iyo beero waawayn. وَحَدَآئِقَ غُلْبًا ﴿٣٠﴾

31. Iyo faakiho (khudaar) iyo daaq. وَفَٰكِهَةً وَأَبًّا ﴿٣١﴾

32. Si aad ugu intifaacdaan idinka iyo xoolihiinnu. مَّتَٰعًا لَّكُمْ وَلِأَنْعَٰمِكُمْ ﴿٣٢﴾

33. Markay qayladii darrayd timaaddo (oo suurka la afuufo). فَإِذَا جَآءَتِ ٱلصَّآخَّةُ ﴿٣٣﴾

34. Waa maalinta ruuxu ka carari walaalkiis. يَوْمَ يَفِرُّ ٱلْمَرْءُ مِنْ أَخِيهِ ﴿٣٤﴾

35. Iyo hooyadiis iyo aabihiis. وَأُمِّهِۦ وَأَبِيهِ ﴿٣٥﴾

36. Iyo haweeneydiisii iyo carruurtiisii. وَصَٰحِبَتِهِۦ وَبَنِيهِ ﴿٣٦﴾

37. Ruux walbana maalintaas waxaa shuqlin xaalkiisa. لِكُلِّ ٱمْرِئٍ مِّنْهُمْ يَوْمَئِذٍ شَأْنٌ يُغْنِيهِ ﴿٣٧﴾

38. Wajiyaal maalintaas way nuuri (farxi). وُجُوهٌ يَوْمَئِذٍ مُّسْفِرَةٌ ﴿٣٨﴾

39. Wayna qosli oy bishaaraysan. ضَاحِكَةٌ مُّسْتَبْشِرَةٌ ﴿٣٩﴾

40. Wajiyaalna maalintaas waxaa saaran boor lagu dulleynaayo. وَوُجُوهٌ يَوْمَئِذٍ عَلَيْهَا غَبَرَةٌ ﴿٤٠﴾

41. Waxaana dabooli madow (iyo naxdin). تَرْهَقُهَا قَتَرَةٌ ﴿٤١﴾

42. Kuwaasina waa gaalada faasiqiinta ah (aadna u xun).

أُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْكَفَرَةُ ٱلْفَجَرَةُ ﴿٤٢﴾

Alle wuu u nicmeeyay dadka, cirka iyo dhulkana khayraad buu uga soo saaray si ay ugu nacfiyaan uguna mahadiyaan, maxaa yeelay waxaa iman maalin daran oo ruuxba ruux ka carari dhibaato darteed kolay tahay qaraabadii, dadku labuu noqon, mid farxoo bishaaraysta camalkiisii fiicnaa dartiis, iyo mid dullaysan oo naxsan waana gaalada xad-gudubtay. Sawda haweenaydii Nabiga ahayd waxaa laga wariyay inay tidhi: Rasuulkii Alle wuxuu yidhi naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee: «dadka waxaa la soo bixin iyagoo kaba la', oo qaawan oon gudnayn dhididkuna xakameeyay gaadhayna dhagaha» markaasaan idhi: Alla cawradaay! qaar qaar ma dayi? Markaasuu yidhi: dadka waa la shuqliyay (ruux walba xaalkiisaa ku fillaan). **[Cabasa: 24-42].**

Suurat At-Takwiir

سُورَةُ التَّكۡوِيرِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Marka qorraxda la duubo (qiyaamada).
إِذَا ٱلشَّمۡسُ كُوِّرَتۡ ١

2. Xiddiguhuna daataan (iyagoo madow).
وَإِذَا ٱلنُّجُومُ ٱنكَدَرَتۡ ٢

3. Buurahana la kexeeyo (la rujiyo).
وَإِذَا ٱلۡجِبَالُ سُيِّرَتۡ ٣

4. Geelii rimmanaana la halleeyo (oo la dayaco).
وَإِذَا ٱلۡعِشَارُ عُطِّلَتۡ ٤

5. Dugaaggana la kulmiyo (qisaas darteed).
وَإِذَا ٱلۡوُحُوشُ حُشِرَتۡ ٥

6. Badahana la kululeeyo.
وَإِذَا ٱلۡبِحَارُ سُجِّرَتۡ ٦

7. Naf walbana jidhkeedii lagu lammaaneeyo.
وَإِذَا ٱلنُّفُوسُ زُوِّجَتۡ ٧

8. Gabdhihii la xabaalnololiyayna la warsado.
وَإِذَا ٱلۡمَوۡءُۥدَةُ سُئِلَتۡ ٨

9. Maxaa dambi ah oo loo dilay.
بِأَيِّ ذَنۢبٖ قُتِلَتۡ ٩

10. Kutubta (camalkana) la fidiyo.
وَإِذَا ٱلصُّحُفُ نُشِرَتۡ ١٠

11. Samadana la rujiyo.
وَإِذَا ٱلسَّمَآءُ كُشِطَتۡ ١١

12. Naarta jaxiimana la huriyo.
وَإِذَا ٱلۡجَحِيمُ سُعِّرَتۡ ١٢

13. Jannadana la dhaweeyo.
وَإِذَا ٱلۡجَنَّةُ أُزۡلِفَتۡ ١٣

14. Waxay ogaan nafu waxay camal fashay.
عَلِمَتۡ نَفۡسٞ مَّآ أَحۡضَرَتۡ ١٤

Alle isagaa wax walba abuuray, wuxuu doonana wuu falaa, qiyaamadu markay imaanna wuxuu muujin calaamooyin iyadoo ruux walba Alle tusin wuxuu adduunka ku camal-falay, kana abaal-marin khayr iyo sharba. Abuu Hurayra wuxuu ka wariyay Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee): qorraxda iyo dayaxa waa la duubi maalinta qiyaame. **[At-Takwiir: 1-14].**

15. Waxaan ku dhaartay «buu Alle yidhi» xiddigaha qarsooma (maalintii).

فَلَآ أُقۡسِمُ بِٱلۡخُنَّسِ ١٥

16. Ee socda iftiinka qorraxdana ku qarsooma.

ٱلۡجَوَارِ ٱلۡكُنَّسِ ١٦

17. Iyo habeenku markuu jeedsado.

وَٱلَّيۡلِ إِذَا عَسۡعَسَ ١٧

18. Iyo subaxu markuu soo qaabilo.

وَٱلصُّبۡحِ إِذَا تَنَفَّسَ ١٨

19. Ee quraanku waa hadalka Alle, oo uu soo raray malag sharaf lah.

إِنَّهُۥ لَقَوۡلُ رَسُولٖ كَرِيمٖ ١٩

20. Xoogna leh Alle agtiisana daraja ku leh.

ذِي قُوَّةٍ عِندَ ذِي ٱلۡعَرۡشِ مَكِينٖ ٢٠

21. Laguna addeeco halkaas aamminna ah.

مُّطَاعٖ ثَمَّ أَمِينٖ ٢١

22. Saaxiibkiinnu (Nabiguna) ma aha ku waalan.

وَمَا صَاحِبُكُم بِمَجۡنُونٖ ٢٢

23. Horay buuna ugu arkay Jibriil jahadii caddayd (bariga Maka).

وَلَقَدۡ رَءَاهُ بِٱلۡأُفُقِ ٱلۡمُبِينِ ٢٣

24. Nabiguna ma aha ruux looga shakiyo waxa maqan oo qaybka ah, amaba ku bakhayla.

وَمَا هُوَ عَلَى ٱلۡغَيۡبِ بِضَنِينٖ ٢٤

25. Quraankuna ma aha hadal shaydaan la fogeeyay.

وَمَا هُوَ بِقَوۡلِ شَيۡطَٰنٖ رَّجِيمٖ ٢٥

26. Ee xaggeed gaalooy aadaysaan.

فَأَيۡنَ تَذۡهَبُونَ ٢٦

27. Quraankuna waxaan waanada caalamka ahayn ma aha (oo waa waano).

إِنۡ هُوَ إِلَّا ذِكۡرٞ لِّلۡعَٰلَمِينَ ٢٧

28. Ruuxii doona inuu toosnaado (yuuna u yahay).

29. Waxna ma dooni kartaan in Rabbiga caalamku doona mooyee.

لِمَن شَآءَ مِنكُمۡ أَن يَسۡتَقِيمَ ﴿٢٨﴾

وَمَا تَشَآءُونَ إِلَّآ أَن يَشَآءَ ٱللَّهُ رَبُّ ٱلۡعَٰلَمِينَ ﴿٢٩﴾

Xiddigaha iyo khalqiga kalaba dhammaantiis Alle ayaa abuuray, wuxuuna Alle ugu dhaartay qiimohooda iyo say wax la yaab leh u yihiin. Quraankuna waa hadalkii Alle ee uu malaku jibrill u soo dhiibay si uu Nabiga Muxammad ah naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee u gaadhsiiyo, isna caalamka u gudbiyo, waxaana lagu yaqaan Nabiga ammaano, run, caqli iyo gaadhsiin xaqa sida Nabiyada kaleba. Markay soo dagtay aayaddan: (ruuxiinnii doona inuu toosnaado) yuu Abuu Jahal yidhi: amarka annagaa iska leh, haddaan doonno waan toosnaanhaynaa, haddaan doonnana ma toosnaanayno, markaasaa Alle soo dajiyay korahaaye (wax ma dooni kartaan in Rabbiga caalamku doono mooyeen). **[At-Takwiir: 15-29].**

Suurat Al-Infidhaar

سُورَةُ الانفِطَارِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Markay samadu dildillaacdo.
إِذَا ٱلسَّمَآءُ ٱنفَطَرَتْ ﴿١﴾

2. Xiddiguhuna daataan.
وَإِذَا ٱلْكَوَاكِبُ ٱنتَثَرَتْ ﴿٢﴾

3. Badahana laysku furo.
وَإِذَا ٱلْبِحَارُ فُجِّرَتْ ﴿٣﴾

4. Xabaalahana laga soo bixiyo (dadkii).
وَإِذَا ٱلْقُبُورُ بُعْثِرَتْ ﴿٤﴾

5. Waxay ogaan nafu waxay hor marsatay iyo waxay dibmarisay.
عَلِمَتْ نَفْسٌ مَّا قَدَّمَتْ وَأَخَّرَتْ ﴿٥﴾

6. Dadow maxaa kugu kadiyay Rabbigaaga sharafta leh.
يَٰٓأَيُّهَا ٱلْإِنسَٰنُ مَا غَرَّكَ بِرَبِّكَ ٱلْكَرِيمِ ﴿٦﴾

7. Ee kii ku abuuray ah kuna ekeeyay kuna simay.
ٱلَّذِى خَلَقَكَ فَسَوَّىٰكَ فَعَدَلَكَ ﴿٧﴾

8. Siduu doonana kuu sameeyey.
فِىٓ أَىِّ صُورَةٍ مَّا شَآءَ رَكَّبَكَ ﴿٨﴾

9. Saas ma aha ee waxaad beeninaysaan abaal marinta.
كَلَّا بَلْ تُكَذِّبُونَ بِٱلدِّينِ ﴿٩﴾

10. Malaa'ig baana idin ilaalinaysa.
وَإِنَّ عَلَيْكُمْ لَحَٰفِظِينَ ﴿١٠﴾

11. Oo sharaf leh waxna qori.
كِرَامًا كَٰتِبِينَ ﴿١١﴾

12. Ogna waxaad falaysaan.
يَعْلَمُونَ مَا تَفْعَلُونَ ﴿١٢﴾

13. Kuwa wanaagsani waxay gali naciima.
إِنَّ ٱلْأَبْرَارَ لَفِى نَعِيمٍ ﴿١٣﴾

14. Kuwa xun xunna waxay gali jaxiimo.
وَإِنَّ ٱلْفُجَّارَ لَفِى جَحِيمٍ ﴿١٤﴾

15. Wayna ku guban maalinta abaalmarinta.

يَصْلَوْنَهَا يَوْمَ ٱلدِّينِ ﴿١٥﴾

16. Kamana maqnaadaan naarta.

وَمَا هُمْ عَنْهَا بِغَآئِبِينَ ﴿١٦﴾

17. Maalinta abaalmarinta ma taqaannaa.

وَمَآ أَدْرَىٰكَ مَا يَوْمُ ٱلدِّينِ ﴿١٧﴾

18. Haddana ma taqaannaa maalinta abaalmarinta.

ثُمَّ مَآ أَدْرَىٰكَ مَا يَوْمُ ٱلدِّينِ ﴿١٨﴾

19. Waa maalinta ayna u hanannin nafna naf kale waxba, amarkana maalintaas waxaa iska leh Alle.

يَوْمَ لَا تَمْلِكُ نَفْسٌ لِّنَفْسٍ شَيْـًٔا ۖ
وَٱلْأَمْرُ يَوْمَئِذٍ لِّلَّهِ ﴿١٩﴾

Marka qiyaamadu dhici waxaa iman doorsoon iyo is baddallo badan, ruux walbana wuxuu ogaan dhabta, saa daraadeed mar haddii Alle dadka kulmin, abuurkoodiina wanaajiyay, caqlina siiyay, malaa'igna u soo diray og wuxuu fali, jidkuna laba yahay, janno iyo naar, ruuxna ruux kale wax u taraynin idan Alle la'aantiis, amarkana dhammaan Alle iska leeyahay miyayna habboonayn Alle aqoonsi, wanaag falid, xumaan ka tagid iyo u darbasho maalintaas.

Cabdullahi ibnu Cumar wuxuu ka wariyay Nabiga: «ruuxii ku farxi inuu qiyaamaha dhab u arko ha akhriyo (marka qorraxda la duubo), (marka samadu dildillaacdo) iyo (marka samadu jeexjeexanto). **[Al-Infidhaar: 1-19].**

Suurat Al-Mudhafifiin

سُورَةُ ٱلْمُطَفِّفِينَ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Wuxuu halaag u sugnaaday kuwa xaqa nusqaamiya.

وَيْلٌ لِّلْمُطَفِّفِينَ ﴿١﴾

2. Waa kuwa markay dadka ka soo beeganna oofsada (dhammaystirta).

ٱلَّذِينَ إِذَا ٱكْتَالُوا۟ عَلَى ٱلنَّاسِ يَسْتَوْفُونَ ﴿٢﴾

3. Markay u miisi ama u miisaamina ka nusqaamiya.

وَإِذَا كَالُوهُمْ أَو وَّزَنُوهُمْ يُخْسِرُونَ ﴿٣﴾

4. Miyayna u malaynaynin (oo aysan ka cabsaneyn) kuwaasi in loo soo bixin.

أَلَا يَظُنُّ أُو۟لَٰٓئِكَ أَنَّهُم مَّبْعُوثُونَ ﴿٤﴾

5. Maalin wayn darteed (qiyaamada).

لِيَوْمٍ عَظِيمٍ ﴿٥﴾

6. Maalinta dadku u istaagi Rabbiga caalamka.

يَوْمَ يَقُومُ ٱلنَّاسُ لِرَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٦﴾

7. Saas ma aha ee camalka kuwa xun wuxuu ku qoran yahay sijiin.

كَلَّآ إِنَّ كِتَٰبَ ٱلْفُجَّارِ لَفِى سِجِّينٍ ﴿٧﴾

8. Ma taqaannaa sijiin.

وَمَآ أَدْرَىٰكَ مَا سِجِّينٌ ﴿٨﴾

9. Waa kitaab calaamaysan.

كِتَٰبٌ مَّرْقُومٌ ﴿٩﴾

10. Halaagna wuxuu u sugnaaday maalintaas kuwa beeniya (xaqa).

وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ﴿١٠﴾

11. Ee ah kuwa beeniya maalinta abaal marinta.

ٱلَّذِينَ يُكَذِّبُونَ بِيَوْمِ ٱلدِّينِ ﴿١١﴾

12. Waxaana beeniya xaqa mid xad gudba oo dambiila ah.

وَمَا يُكَذِّبُ بِهِۦٓ إِلَّا كُلُّ مُعْتَدٍ أَثِيمٍ ﴿١٢﴾

13. Marka quraanka lagu akhriyana yidhaahda waa warkii dadkii hore.

إِذَا تُتْلَىٰ عَلَيْهِ ءَايَٰتُنَا قَالَ أَسَٰطِيرُ ٱلْأَوَّلِينَ ﴿١٣﴾

Ganacsiga iyo wax kala gadashadu waa xalaal bannaan haddii jidkeeda la mariyo, waana xaaraan xun haddii la leexiyo oo dadka lagu boobo. Ruuxiise Alle ka yaabi iyo hor istaaggiisa maalinta qiyaame waa inuu iska jiraa ganacsi xun, illeen Alle caddibaad daran yuu ugu gooddiyay kuwaase. Nabiguna wuxuu yidhi naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee: «maalinta dadku u istaagi waynanka Rabbiga caalamka maalinta qiyaame, dhididkuna dadkuu xakamayn ilaa uu ka gaadho dhagahooda». Waxaa wariyay Imaamu Axmad binu Xambal. **[Al-Mudhafifiin: 1-13].**

14. Saas ma aha ee waxaa fuulay qalbigooda (mirdhiyay) waxay kasban jireen oo dambi ah.

كَلَّا ۖ بَلْ ۜ رَانَ عَلَىٰ قُلُوبِهِم مَّا كَانُوا۟ يَكْسِبُونَ ﴿١٤﴾

15. Waxaa sugan in Rabbigood maalintaas (qiyaame) laga xijaabi.

كَلَّآ إِنَّهُمْ عَن رَّبِّهِمْ يَوْمَئِذٍ لَّمَحْجُوبُونَ ﴿١٥﴾

16. Markaasna ay gali jaxiimo.

ثُمَّ إِنَّهُمْ لَصَالُوا۟ ٱلْجَحِيمِ ﴿١٦﴾

17. Waxaana loo odhan tani waa naartaad ku beeninayseen adduunka.

ثُمَّ يُقَالُ هَٰذَا ٱلَّذِى كُنتُم بِهِۦ تُكَذِّبُونَ ﴿١٧﴾

18. Saas xaalku ma aha ee kitaabka iyo camalka dadka wanaagsan wuxuu ku qoran yahay cilliyiin.

كَلَّآ إِنَّ كِتَٰبَ ٱلْأَبْرَارِ لَفِى عِلِّيِّينَ ﴿١٨﴾

19. Cilliyiin ma taqaannaa.

وَمَآ أَدْرَىٰكَ مَا عِلِّيُّونَ ﴿١٩﴾

20. Waa kitaab (dadka fiican magacooda lagu qoray).

كِتَٰبٌ مَّرْقُومٌ ﴿٢٠﴾

21. Waxaana gacanta ku haya (oo korjooge u ah, soona xaadira) malaa'ig Alle u dhaw.

يَشْهَدُهُ ٱلْمُقَرَّبُونَ ﴿٢١﴾

22. Kuwa wanaagsan waxay gali naciima (janno).

إِنَّ ٱلْأَبْرَارَ لَفِى نَعِيمٍ ﴿٢٢﴾

عَلَى ٱلْأَرَآئِكِ يَنظُرُونَ ﴿٢٣﴾

23. (Maalinta qiyaamana) sariiro yay ku dangiigsanaan oy wax ka daawan.

تَعْرِفُ فِى وُجُوهِهِمْ نَضْرَةَ ٱلنَّعِيمِ ﴿٢٤﴾

24. Wajigooda yaanad ka garan nicmada.

يُسْقَوْنَ مِن رَّحِيقٍ مَّخْتُومٍ ﴿٢٥﴾

25. Waxaana laga waraabin cabbid la dhawray (oo macaan).

خِتَـٰمُهُۥ مِسْكٌ ۚ وَفِى ذَٰلِكَ فَلْيَتَنَافَسِ ٱلْمُتَنَفِسُونَ ﴿٢٦﴾

26. Waxaana lagu khatimaa miski iyo udgoon, ee arrintaas ha u tartameen tartamayaashu.

وَمِزَاجُهُۥ مِن تَسْنِيمٍ ﴿٢٧﴾

27. Waxaana lagu dheehi cabbitaan sare (oo kor uga yimaada, lana barxin).

عَيْنًا يَشْرَبُ بِهَا ٱلْمُقَرَّبُونَ ﴿٢٨﴾

28. Waa il ay ka cabbaan kuwa Alle u dhaw.

Dambigu wuxuu halleeyaa quluubta dadka, wuxuuna sabab u noqdaa Alle oo iska xijaaba ruuxaas, sidaa oo kale wuxuu u hoggaamiyaa dadka naarta iyo caddibaad. Dadkase Alle addeeca waxay ku raaxaysan janno iyo cabbid macaan oo xalaal ah iyo aragga Rabbigood, waana xaal loo orotamo loona dadaalo. **[Al-Mudhafifiin: 14-28].**

إِنَّ ٱلَّذِينَ أَجْرَمُوا۟ كَانُوا۟ مِنَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ يَضْحَكُونَ ﴿٢٩﴾

29. Kuwii dambaabay (gaaloobay) waxay ahaayeen kuwa ku qosla kuwii xaqa rumeeyay.

وَإِذَا مَرُّوا۟ بِهِمْ يَتَغَامَزُونَ ﴿٣٠﴾

30. Hadday maraanna way xaqiri jireen.

وَإِذَا ٱنقَلَبُوٓا۟ إِلَىٰٓ أَهْلِهِمُ ٱنقَلَبُوا۟ فَكِهِينَ ﴿٣١﴾

31. Markay guryahoodii u noqdaanna (gaaladu) waxay noqon jireen iyagoo isla wayn (oo raaxaysan).

وَإِذَا رَأَوْهُمْ قَالُوٓا۟ إِنَّ هَـٰٓؤُلَآءِ لَضَآلُّونَ ﴿٣٢﴾

32. Markay arkaan mu'miniintana waxay dhahaan kuwaasi waa dhunsan yihiin.

وَمَآ أُرۡسِلُواْ عَلَيۡهِمۡ حَٰفِظِينَ ٣٣

33. Loomana dirin inay ilaaliyaan mu'miniinta.

فَٱلۡيَوۡمَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ مِنَ ٱلۡكُفَّارِ يَضۡحَكُونَ ٣٤

34. Maalinta (qiyaame) kuwa rumeeyay xaqa waxay ku qosli gaalada.

عَلَى ٱلۡأَرَآئِكِ يَنظُرُونَ ٣٥

35. Sariiro korkood yayna wax ka daawan.

هَلۡ ثُوِّبَ ٱلۡكُفَّارُ مَا كَانُواْ يَفۡعَلُونَ ٣٦

36. Miyaan laga abaalmarinnin gaalada waxay falayeen. (Waa laga abaalmariyay).

Isla waynida iyo kibirka iyo dadka xaqa rumeeyay oo la xaqiro lana liido waxay dhaxalsiin dulli caddibaad aakhiro iyo adduunba, waana shaqada iyo falka kuwa xunxun een caqliga lahayn. Eeg waxay ku dambeeyeen Ree-Caad, fircoon, qoomkii Nabi Nuux, qureeshtii reer Makaad iyo cid kasta oo isla waynaatay xadna gudubtay, saa darteed waa in laga digtoonaado falalkaas oo kale, wanaaggana la raaco, illeen waa layska abaal marin wixii la falaye. **[Al-Mudhafifiin: 29-36].**

Suurat Al-Inshiqaaq

سُورَةُ الانشِقَاقِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Marka samadu jeexjeexanto (qiyaamada).

إِذَا ٱلسَّمَآءُ ٱنشَقَّتْ ﴿١﴾

2. Oy Alle addeecdo waana xaq addeeciddiisunee.

وَأَذِنَتْ لِرَبِّهَا وَحُقَّتْ ﴿٢﴾

3. Marka dhulka la fidiyo (qiyaamada).

وَإِذَا ٱلْأَرْضُ مُدَّتْ ﴿٣﴾

4. Oo uu soo tuuro waxa ku hoos jira, kana madhnaado.

وَأَلْقَتْ مَا فِيهَا وَتَخَلَّتْ ﴿٤﴾

5. Oos Rabbi addeeco waana xaq addeeciddaasina (wuxuu la kulmi ruux walba camalkiisa).

وَأَذِنَتْ لِرَبِّهَا وَحُقَّتْ ﴿٥﴾

6. Dadow waxaad u dhibboon ood u camalfali xagga Alle, waadna la kulmi.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلْإِنسَٰنُ إِنَّكَ كَادِحٌ إِلَىٰ رَبِّكَ كَدْحًا فَمُلَٰقِيهِ ﴿٦﴾

7. Ruuxiise kitaabkiisa (fiican) midigta laga siiyo (waa mu'minkee).

فَأَمَّا مَنْ أُوتِيَ كِتَٰبَهُۥ بِيَمِينِهِۦ ﴿٧﴾

8. Waxaa la xisaabin xisaab fudud.

فَسَوْفَ يُحَاسَبُ حِسَابًا يَسِيرًا ﴿٨﴾

9. Wuxuuna ku noqon ciddiisii (jannada joogtay) isagoo faraxsan.

وَيَنقَلِبُ إِلَىٰٓ أَهْلِهِۦ مَسْرُورًا ﴿٩﴾

10. Ruuxiise kitaabkiisa laga siiyo gadaashiisa (waa dadka xune).

وَأَمَّا مَنْ أُوتِيَ كِتَٰبَهُۥ وَرَآءَ ظَهْرِهِۦ ﴿١٠﴾

11. Wuxuu u yeedhan halaag.
فَسَوْفَ يَدْعُواْ ثُبُورًا ﴿١١﴾

12. Wuxuuna gali naarta saciira.
وَيَصْلَىٰ سَعِيرًا ﴿١٢﴾

13. Maxaa yeelay markuu (adduunkii) dadkiisii dhexjoogay yuu kibirsanaa.
إِنَّهُۥ كَانَ فِىٓ أَهْلِهِۦ مَسْرُورًا ﴿١٣﴾

14. Wuxuuna malaynayay inuusan Alle u soo noqonaynin (qiyaame).
إِنَّهُۥ ظَنَّ أَن لَّن يَحُورَ ﴿١٤﴾

15. Saas ma ahee Alle waa arkaayey (ogaana wuxuu sameynaayey markuu adduunka joogay).
بَلَىٰٓ إِنَّ رَبَّهُۥ كَانَ بِهِۦ بَصِيرًا ﴿١٥﴾

Qudrada Alle iyo awooddiisu wax walba waa ka sarraysaa, maxaa yeelay isagaa waxwalba ahaysiiyay, wax awooddiisa ka baxsanna ma jiro, laba waddo umbaana jira, ruux walbana wuxuu qaadi tuu u camal falo. Rasuulka Alle naxariis iyo nabadgalyana korkiisa Alle ha yeelee wuxuu yidhi: idinku waxaad falaysaan camallo aan la aqoonin, waxayna u dhawdahay inuu u soo noqdo kii maqnaa reerkiisii oo uu farxo ama naxo. Waxaa wariyay dabaraani. **[Al-Inshiqaaq: 1-15].**

16. Waxaan ku dhaartay «buu yidhi Alle» midabka qorrax dhaca.
فَلَآ أُقْسِمُ بِٱلشَّفَقِ ﴿١٦﴾

17. Iyo habeenka iyo wuxuu qariyay.
وَٱلَّيْلِ وَمَا وَسَقَ ﴿١٧﴾

18. Iyo dayaxa markuu nuurku buuxsamo.
وَٱلْقَمَرِ إِذَا ٱتَّسَقَ ﴿١٨﴾

19. Ee dadkow waxaad koraysaan xaalado kala duwan.
لَتَرْكَبُنَّ طَبَقًا عَن طَبَقٍ ﴿١٩﴾

20. Dadka maxaa u sugnaaday oy la rumayn waayeen (xaqa).
فَمَا لَهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٢٠﴾

21. Marka quraanka lagu akhriyana ayna u sujuudaynin.
وَإِذَا قُرِئَ عَلَيْهِمُ ٱلْقُرْءَانُ لَا يَسْجُدُونَ ۩ ﴿٢١﴾

22. Saas ma ahee kuwa gaaloobay waxay beenin (xaqa).
بَلِ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ يُكَذِّبُونَ ﴿٢٢﴾

23. Alle na waa og yahay waxay qarsan.

24. Ugu bishaaree caddibaad daran.

25. Hase yeeshee kuwa rumeeyay xaqa camal fiicanna falay waxay mudan ajri aan go'aynin.

وَٱللَّهُ أَعۡلَمُ بِمَا يُوعُونَ ﴿٢٣﴾

فَبَشِّرۡهُم بِعَذَابٍ أَلِيمٍ ﴿٢٤﴾

إِلَّا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ لَهُمۡ أَجۡرٌ غَيۡرُ مَمۡنُونٍ ﴿٢٥﴾

Alle wuxuu ku dhaartay in dadku marin xaalado kala duwan, sida yarida, duqnimada, caafimaadka, cudurka, hodontinimada, saboolnimada iyo geerida iyo nolosha, haddana saas dadku isagoo arka yuu xaqa beenin oo leexan, ruuxiise camal fiican la yimaadda lagama nusqaamiyo ee wuu la kulmi isagoo dhan, dadkuna shaqay ku dhibboon, waxaana la huraynin la kulanka Alle. **[Al-Inshiqaaq: 16-25].**

Suurat Al-Buruuj

سُورَةُ ٱلْبُرُوجِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Alle wuxuu ku dhaartay samada xiddigaha leh (iyo jidadkooda).

وَٱلسَّمَآءِ ذَاتِ ٱلْبُرُوجِ ﴿١﴾

2. Iyo maalinta laysu yaboohay (qiyaamada).

وَٱلْيَوْمِ ٱلْمَوْعُودِ ﴿٢﴾

3. Iyo dadka joogsan maalintaas iyo waxyaalaha iman maalintaas.

وَشَاهِدٍ وَمَشْهُودٍ ﴿٣﴾

4. Ee lacnadi ha ku dhacdo kuwii godka lahaa (mu'miniinta lagu caddibo).

قُتِلَ أَصْحَٰبُ ٱلْأُخْدُودِ ﴿٤﴾

5. Ee ahaa naar olal (iyo shidaal) leh.

ٱلنَّارِ ذَاتِ ٱلْوَقُودِ ﴿٥﴾

6. Gaaladiina ay kor fadhiyeen godka.

إِذْ هُمْ عَلَيْهَا قُعُودٌ ﴿٦﴾

7. Iyagoo daawan waxa lagu fali mu'miniinta «oo jirrabaad ah».

وَهُمْ عَلَىٰ مَا يَفْعَلُونَ بِٱلْمُؤْمِنِينَ شُهُودٌ ﴿٧﴾

8. Waxay ku neceen dadkaasna ma jiro oon ahayn inay rumeeyeen Allaha adkaada ee la mahadiyo.

وَمَا نَقَمُوا۟ مِنْهُمْ إِلَّآ أَن يُؤْمِنُوا۟ بِٱللَّهِ ٱلْعَزِيزِ ٱلْحَمِيدِ ﴿٨﴾

9. Ee leh samada iyo dhulka xukunkooda, Alle na wax walba wuu ujeedaa.

ٱلَّذِى لَهُۥ مُلْكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ وَٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ شَهِيدٌ ﴿٩﴾

10. Kuwa mu'miniinta rag iyo haweenba jirraba haddana aan tawbadkeenin waxay mudan caddibaadda jahannamo iyo caddibaad gubi.

إِنَّ ٱلَّذِينَ فَتَنُواْ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ وَٱلۡمُؤۡمِنَٰتِ ثُمَّ لَمۡ يَتُوبُواْ فَلَهُمۡ عَذَابُ جَهَنَّمَ وَلَهُمۡ عَذَابُ ٱلۡحَرِيقِ ١٠

Suuraddani waa suurad wayn oo la yaab leh kana qisoon inay jirtay in nin xun oo gaal ah xukumi jiray dad, hase yeeshee dadkii qaarkii ay xaqa rumeeyeen, markaas uu faray ciidammadiisii in god dab lagu shido, ruuxii diinta ka bixi waayana lagu tuuro, isaga iyo colkiisiina ay daawanayeen, hase yeeshee mu'miniintii xaqii bay ku sugnaadeen si kastoo loo caddibay, taasina waxay ku tusin ku sugnaanta xaqa iyo adkaysiga si kastoo dhib kuu soo qaabilo. **[Al-Buruuj: 1-10].**

11. Kuwa xaqa rumeeyey camal fiicanna falay waxay mudan jannooyin ay dureeri dhexdeeda wabiyaal, taasina waa liibaan wayn.

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ لَهُمۡ جَنَّٰتٞ تَجۡرِي مِن تَحۡتِهَا ٱلۡأَنۡهَٰرُۚ ذَٰلِكَ ٱلۡفَوۡزُ ٱلۡكَبِيرُ ١١

12. Qabashada Alle na (ciqaabtiisu) way daran tahay.

إِنَّ بَطۡشَ رَبِّكَ لَشَدِيدٌ ١٢

13. Alle isagaa khalqiga ahaysiiyay soona celin.

إِنَّهُۥ هُوَ يُبۡدِئُ وَيُعِيدُ ١٣

14. Waana dambidhaaf badane jecel (kuwa addeeca).

وَهُوَ ٱلۡغَفُورُ ٱلۡوَدُودُ ١٤

15. Carshiga sharafta lehna isagaa iska leh.

ذُو ٱلۡعَرۡشِ ٱلۡمَجِيدُ ١٥

16. Wuuna falaa wuxuu doono.

فَعَّالٞ لِّمَا يُرِيدُ ١٦

17. Ma ku soo gaadhay warkii junuuddii (gaaladii).

هَلۡ أَتَىٰكَ حَدِيثُ ٱلۡجُنُودِ ١٧

18. Fircoon iyo Thamuud.

فِرۡعَوۡنَ وَثَمُودَ ١٨

19. Hase yeeshee kuwii gaaloobay waxay ku sugan yihiin beenin la beeniyo (xaqa).

بَلِ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ فِي تَكۡذِيبٖ ١٩

20. Alle na waa koobay (kamana baxsadaan).

وَٱللَّهُ مِن وَرَآئِهِم مُّحِيطٌ ﴿٢٠﴾

21. Waase quraan sharaf leh.

بَلْ هُوَ قُرْءَانٌ مَّجِيدٌ ﴿٢١﴾

22. Oo ku qoran loox la dhawray (looxulmaxfuudka).

فِى لَوْحٍ مَّحْفُوظٍۭ ﴿٢٢﴾

Kuwa xaqa rumeeyay oo camal fiican fala janno iyo wanaagbaa u dambeeya waana liibaan wayn, Alle na wuxuu doonuu sameeyaa, waana awood wayn yahay, gaaladii iyo xaq-diidayaashiina waa kii ciqaabay, waxay gaaladu beeninna waa uun quraan sharaf leh oo la dhawray. Xasan Albasri wuxuu yidhi: quraanka sharafta leh wuxuu ku sugan yahay Alle agtiisa looxulmaxfuudka, wuxuuna ka soo dajin wuxuu doono, kuna dajin cidduu doono oo khaliqigiisa ah. **[Al-Buruuj: 11-22].**

Suurat Adh-Dhaariq

سُورَةُ ٱلطَّارِقِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

وَٱلسَّمَآءِ وَٱلطَّارِقِ ﴿١﴾

1. Alle wuxuu ku dhaartay samada iyo xiddigga guura.

وَمَآ أَدْرَىٰكَ مَا ٱلطَّارِقُ ﴿٢﴾

2. Ma taqaan xiddigga guura.

ٱلنَّجْمُ ٱلثَّاقِبُ ﴿٣﴾

3. Waa xiddig ifa.

إِن كُلُّ نَفْسٍ لَّمَّا عَلَيْهَا حَافِظٌ ﴿٤﴾

4. Ee naf walba waxaa kor jooga (malag) ilaaliya.

فَلْيَنظُرِ ٱلْإِنسَٰنُ مِمَّ خُلِقَ ﴿٥﴾

5. Ee dadku ha dayo waxa laga abuuray.

خُلِقَ مِن مَّآءٍ دَافِقٍ ﴿٦﴾

6. Waxaa laga abuuray biyo booda.

يَخْرُجُ مِنۢ بَيْنِ ٱلصُّلْبِ وَٱلتَّرَآئِبِ ﴿٧﴾

7. Kana soo baxa dhabar iyo laab dhexdood.

إِنَّهُۥ عَلَىٰ رَجْعِهِۦ لَقَادِرٌ ﴿٨﴾

8. Alle na waa karaa soo celinta dadka (qiyaamada).

يَوْمَ تُبْلَى ٱلسَّرَآئِرُ ﴿٩﴾

9. Maalinta la imtixaani waxa (laabta) ku qarsoon.

فَمَا لَهُۥ مِن قُوَّةٍ وَلَا نَاصِرٍ ﴿١٠﴾

10. Dadkuna xoog ma leh (maalintaas) iyo wax u gargaaara midna.

وَٱلسَّمَآءِ ذَاتِ ٱلرَّجْعِ ﴿١١﴾

11. Alle na wuxuu ku dhaartay samada roobka leh.

وَٱلْأَرْضِ ذَاتِ ٱلصَّدْعِ ﴿١٢﴾

12. Iyo dhulka jeexma (waxna ka soo baxo).

13. Ee quraanku waa hadal wax kala bixiya (wanaagga iyo xumaanta).
إِنَّهُۥ لَقَوْلٌ فَصْلٌ ﴿١٣﴾

14. Ciyaarna ma aha (ee waa dhab).
وَمَا هُوَ بِٱلْهَزْلِ ﴿١٤﴾

15. Gaaladu dhagar bay dhakri.
إِنَّهُمْ يَكِيدُونَ كَيْدًا ﴿١٥﴾

16. Annagu waanu dhakri dhagar (booskeedi dhacday).
وَأَكِيدُ كَيْدًا ﴿١٦﴾

17. Ee u sug gaalada wax yar.
فَمَهِّلِ ٱلْكَٰفِرِينَ أَمْهِلْهُمْ رُوَيْدًا ﴿١٧﴾

Naf walba waxaa ilaaliya malag waana la xisaabin doonaa maalinta wixii qarsoonaa la faydi, ee waa in qalbiga, niyada, iyo camalkaba la wanaajiyaa, xumaan, dhagar iyo khiyaamana laga fogaado, illeen Alle cidna kama fakatee. **[Adh-Dhaariq; 1-17].**

Suurat Al-Aclaa

سُورَةُ الأَعْلَى

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waynee magaca Alle ee sarreeya.

سَبِّحِ ٱسْمَ رَبِّكَ ٱلْأَعْلَى ﴿١﴾

2. Allaha abuuray khalqiga ekeeyayna.

ٱلَّذِى خَلَقَ فَسَوَّىٰ ﴿٢﴾

3. Allaha wax walba qaddaray jidkana tusiyey.

وَٱلَّذِى قَدَّرَ فَهَدَىٰ ﴿٣﴾

4. Allaha soo bixiya daaqa.

وَٱلَّذِىٓ أَخْرَجَ ٱلْمَرْعَىٰ ﴿٤﴾

5. Kana dhiga markaas ka dib caws engagan oo madow.

فَجَعَلَهُۥ غُثَآءً أَحْوَىٰ ﴿٥﴾

6. Waxaan kaa yeelaynaa mid akhriya quraanka halmaamina maysid.

سَنُقْرِئُكَ فَلَا تَنسَىٰٓ ﴿٦﴾

7. Wuxuu Alle doono mooyee, Alle na waa ogyahay waxa muuqda iyo waxa qarsoonba.

إِلَّا مَا شَآءَ ٱللَّهُ ۚ إِنَّهُۥ يَعْلَمُ ٱلْجَهْرَ وَمَا يَخْفَىٰ ﴿٧﴾

8. Waxaanna kuu fududayn haynaa waddo fiican.

وَنُيَسِّرُكَ لِلْيُسْرَىٰ ﴿٨﴾

9. Ee wax waani (Nabiyow) hadday wax tari waanadu.

فَذَكِّرْ إِن نَّفَعَتِ ٱلذِّكْرَىٰ ﴿٩﴾

10. Waxaa waantoobi ruuxa Alle ka yaabee.

سَيَذَّكَّرُ مَن يَخْشَىٰ ﴿١٠﴾

11. Waxaana ka fogaan waanada ruuxa xune.

وَيَتَجَنَّبُهَا ٱلْأَشْقَى ﴿١١﴾

12. Ee ah mid gali naarti wayneyd.
ٱلَّذِى يَصۡلَى ٱلنَّارَ ٱلۡكُبۡرَىٰ ﴿١٢﴾

13. Oon kuna dhimanayn dhexdeeda kuna noolaanayn.
ثُمَّ لَا يَمُوتُ فِيهَا وَلَا يَحۡيَىٰ ﴿١٣﴾

14. Waxaana liibaanay ruuxii daahir noqda.
قَدۡ أَفۡلَحَ مَن تَزَكَّىٰ ﴿١٤﴾

15. Magaca Alle na xusa, salaaddana tukada.
وَذَكَرَ ٱسۡمَ رَبِّهِۦ فَصَلَّىٰ ﴿١٥﴾

16. Saas ma'aha ee dadow waxaad dooranaysaan nolosha adduunyo ee dhaw.
بَلۡ تُؤۡثِرُونَ ٱلۡحَيَوٰةَ ٱلدُّنۡيَا ﴿١٦﴾

17. Aakhiraase khayr badan baaqina ah (oo hadhi).
وَٱلۡأٓخِرَةُ خَيۡرٞ وَأَبۡقَىٰٓ ﴿١٧﴾

18. Arrintaasuna waxay ku sugan tahay kutubtii hore.
إِنَّ هَٰذَا لَفِى ٱلصُّحُفِ ٱلۡأُولَىٰ ﴿١٨﴾

19. Kutubtii (Nabi) Ibraahim iyo (Nabi) Muuse.
صُحُفِ إِبۡرَٰهِيمَ وَمُوسَىٰ ﴿١٩﴾

Alle ayaa sharaf badan, magaciisuna sidoo kale waa sharaf badan yahay, wax walbana isagaa qadaray, jidkana isagaa kala caddeeyay, ruuxii fiicanna tan san buu qaadi, ruuxii xunna tan daran buu qaadi, wuxuuna ku noolaan maddisha ma noolayso, liibaan waxaa leh ruuxii mu'min noqda xuska Alle iyo salaaddiisana badiya, nolosha adduunyana ayna khaldin, illeen aakharaa fiicane, waxaa la soo sheegayna waxay ku sugnayd kutubihii hore, sida: kii Nabi Ibraahim iyo Nabi Muuse. Saxiixu Muslim waxaa ku sugnaaday: «Alle wuu qaddaray maamulka khalqiga abuuridda samaawaadka iyo dhulka ka hore konton kun oo sano, carshigiisuna wuxuu ahaa biyaha korkooda». **[Al-Aclaa: 1-19].**

Suurat Al-Ghaashiyah

سُورَةُ الغَاشِيَةِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Ma ku soo gaadhay qiyaamada warkeedii.

هَلْ أَتَىٰكَ حَدِيثُ ٱلْغَٰشِيَةِ ﴿١﴾

2. Wajiyaal maalintaas way dullaysnaan.

وُجُوهٌ يَوْمَئِذٍ خَٰشِعَةٌ ﴿٢﴾

3. Waxayna qaban shaqo dhib ah.

عَامِلَةٌ نَّاصِبَةٌ ﴿٣﴾

4. Waxayna gali naar kulul.

تَصْلَىٰ نَارًا حَامِيَةً ﴿٤﴾

5. Waxaana laga waraabin il kulayl daran.

تُسْقَىٰ مِنْ عَيْنٍ ءَانِيَةٍ ﴿٥﴾

6. Wax cunto ahna kama helaan oon ahayn cunno xun (oo wax dhibta).

لَّيْسَ لَهُمْ طَعَامٌ إِلَّا مِن ضَرِيعٍ ﴿٦﴾

7. Taasoon waxna cayilinaynin gaajana wax ka taraynin.

لَّا يُسْمِنُ وَلَا يُغْنِى مِن جُوعٍ ﴿٧﴾

8. Wajiyaalna maalintaas way nicmaysnaan (waa mu'miniinta).

وُجُوهٌ يَوْمَئِذٍ نَّاعِمَةٌ ﴿٨﴾

9. Waxayna ka raalli noqotay camalkeedii.

لِّسَعْيِهَا رَاضِيَةٌ ﴿٩﴾

10. Janno sarana way gali.

فِى جَنَّةٍ عَالِيَةٍ ﴿١٠﴾

11. Kumana maqasho jannada hadal macna darro ah.

لَّا تَسْمَعُ فِيهَا لَٰغِيَةً ﴿١١﴾

12. Waxaana ah dhexdeeda il socota.

فِيهَا عَيْنٌ جَارِيَةٌ ﴿١٢﴾

13. Iyo sariiro la kor yeelay.
فِيهَا سُرُرٌ مَّرْفُوعَةٌ ﴿١٣﴾

14. Iyo koobab la hor dhigay (ehlu jannaha).
وَأَكْوَابٌ مَّوْضُوعَةٌ ﴿١٤﴾

15. Iyo barkimooyin la safay.
وَنَمَارِقُ مَصْفُوفَةٌ ﴿١٥﴾

16. Iyo gogol la fidiyay.
وَزَرَابِيُّ مَبْثُوثَةٌ ﴿١٦﴾

Qiyaamada iyo sida dadku u qaybsami laba waddana u kala qaadi, iyo jannada iyo wanaaggeeda, iyo naarta iyo xumaanteeda, wax badanbuu quraanku ka hadlay, waxaase loo baahan yahay uun in loo darbado, wanaaggana la falo, xumaantana laga tago. Rasuulkii Alle na waxaa laga weriyay naxariis iyo nabadgalyana korkiisa Alle ha yeelee: «war ma jiraa ruux u tafa xaydan jannada, jannadu wax la mid ah ma lehee, Rabbiga kacbadaan ku dhaartaye waa nuur ifi, udgoon gilgilan, sar la qurxiyay, wabi socda, midho bisil, haweeney wanaagsan oo quruxsan, labbis badan, iyo nagaadi waligeed ah oo daar nabad-gashay, iyo faakihad iyo khudaar iyo farax iyo nicmo, meel sare oo quruxsan «markaasay dheheen: haa Rasuulki Allow annagaa u tafaxaydan. Markaasuu yidhi: «dhaha: hadduu Alle doono» markaasay qoomkii dheheen hadduu Alle doono. Waxaa wariyay Ibnu Maajah. Mana xoog badna. **[Al-Ghaashiyah: 1-16].**

17. Miyayna fiirinaynin sida geela loo abuuray.
أَفَلَا يَنظُرُونَ إِلَى ٱلْإِبِلِ كَيْفَ خُلِقَتْ ﴿١٧﴾

18. Iyo sida samada loo kor yeelay.
وَإِلَى ٱلسَّمَآءِ كَيْفَ رُفِعَتْ ﴿١٨﴾

19. Iyo sida buuraha loo taagay.
وَإِلَى ٱلْجِبَالِ كَيْفَ نُصِبَتْ ﴿١٩﴾

20. Iyo sida dhulka loo fidiyay.
وَإِلَى ٱلْأَرْضِ كَيْفَ سُطِحَتْ ﴿٢٠﴾

21. Ee waani dadka waxaad tahay waaniyee (Nabiyow).
فَذَكِّرْ إِنَّمَآ أَنتَ مُذَكِّرٌ ﴿٢١﴾

22. Mana tihid mid xoog ku leh (iyo qasab).
لَّسْتَ عَلَيْهِم بِمُصَيْطِرٍ ﴿٢٢﴾

23. Hase yeeshee ruuxii xaqa ka jeedsada oo gaalooba (ku soo celi xaqa).
إِلَّا مَن تَوَلَّىٰ وَكَفَرَ ﴿٢٣﴾

24. Alle na wuu caddibi caddibaadda u wayn.
فَيُعَذِّبُهُ ٱللَّهُ ٱلْعَذَابَ ٱلْأَكْبَرَ ﴿٢٤﴾

25. Xaggannagayna u soo noqon (khalqigu).

إِنَّ إِلَيْنَآ إِيَابَهُمْ ﴿٢٥﴾

26. Annagaana xisaabin.

ثُمَّ إِنَّ عَلَيْنَا حِسَابَهُم ﴿٢٦﴾

Waa in la fiiriyaa khalqiga Alle laguna waana qaataa, sida cirka, dhulka, buuraha, geela iyo makhluuqaadka kalaba, diinta islaamkuna ma aha qasab iyo dirqi ee waa uun waano, hase yeeshee ruuxii xadgudba oo fasahaad la socda waa la qaban, isagooy u dambayso tii aakhirana, hadalla wuxuu ku dhan yahay in Alle loo noqon uuna xisaabin.Waxaa laga wariyay Abuu Umaame inuu maray Khaalid bini Yaziid binu Macaawiye, markaasuu waydiiyay kalimaddii ugu jilicsanayd ees ka maqlay Rasuulkii Alle (ammaan iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee), wuxuuna yidhi: waxaan Rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee) maqlay isagoo leh: «dhammaantiin jannadaad galaysaan ruux Alle ka carara mooyeen sida neef geela ehelkiisa uga cararo». Waxaa wariyay Imaamu Axmad. **[Al-Ghaashiyah: 17-26].**

Suurat Al-Fajr

سُورَةُ الفَجۡرِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Alle wuxuu ku dhaaraty waabariga.

وَٱلۡفَجۡرِ ﴿١﴾

2. Iyo habeennada tobanka ah (ee carrafo).

وَلَيَالٍ عَشۡرٍ ﴿٢﴾

3. Iyo tirada siman iyo tan is dheer.

وَٱلشَّفۡعِ وَٱلۡوَتۡرِ ﴿٣﴾

4. Iyo habeenku markuu tagayo.

وَٱلَّيۡلِ إِذَا يَسۡرِ ﴿٤﴾

5. Miyayna arrintaasu ahayn wax loogu dhaarto qof caqli leh.

هَلۡ فِي ذَٰلِكَ قَسَمٞ لِّذِي حِجۡرٍ ﴿٥﴾

6. Ma ku soo gaadhay sida Allehaa ku falay Caad.

أَلَمۡ تَرَ كَيۡفَ فَعَلَ رَبُّكَ بِعَادٍ ﴿٦﴾

7. Ee ahaa Irama xooggana lahaa.

إِرَمَ ذَاتِ ٱلۡعِمَادِ ﴿٧﴾

8. Wax la mid ahna aan lugu abuurin dhulka.

ٱلَّتِي لَمۡ يُخۡلَقۡ مِثۡلُهَا فِي ٱلۡبِلَٰدِ ﴿٨﴾

9. Iyo Thamuudkii ahaa dhagaxa kuwa ku jarjara waadiga.

وَثَمُودَ ٱلَّذِينَ جَابُواْ ٱلصَّخۡرَ بِٱلۡوَادِ ﴿٩﴾

10. Iyo Fircoonkii dhakawyada lahaa.

وَفِرۡعَوۡنَ ذِي ٱلۡأَوۡتَادِ ﴿١٠﴾

11. Kuwiina ahaa ku xad gudbay dhulka.

ٱلَّذِينَ طَغَوۡاْ فِي ٱلۡبِلَٰدِ ﴿١١﴾

12. Kuna badiyay dhexdiisa fasaadka.

فَأَكۡثَرُواْ فِيهَا ٱلۡفَسَادَ ﴿١٢﴾

13. Markaasaana Rabbigaa ku shubay caddibaad daran.

فَصَبَّ عَلَيۡهِمۡ رَبُّكَ سَوۡطَ عَذَابٍ ﴿١٣﴾

إِنَّ رَبَّكَ لَبِٱلْمِرْصَادِ ﴿١٤﴾

14. Maxaa yeelay Alle waa u darban yahay (abaalmarinta).

Alle wuxuu abaal-mariyay halaagayna kuwii xaq-diidayaasha ahaa Nabiyadana beeniyay, isna biday xoog iyo tabar, ruux kastoo is kibriyana oo xumaan iyo fasaad dhulka ku sameeyana wuxuu la kulmi waxay la kulmeen, wuxuuna ka cabbi weelkay ka cabbeen, taasina waa sunnada Alle wax baddalina ma jiro. **[Al-Fajr: 1-14].**

فَأَمَّا ٱلْإِنسَٰنُ إِذَا مَا ٱبْتَلَىٰهُ رَبُّهُۥ فَأَكْرَمَهُۥ وَنَعَّمَهُۥ فَيَقُولُ رَبِّىٓ أَكْرَمَنِ ﴿١٥﴾

15. Marka Alle dadka imtixaano oo uu sharfo una nicmeeyo wuxuu dhihi (kan xun) waa la i sharrifay (isagoo faani).

وَأَمَّآ إِذَا مَا ٱبْتَلَىٰهُ فَقَدَرَ عَلَيْهِ رِزْقَهُۥ فَيَقُولُ رَبِّىٓ أَهَٰنَنِ ﴿١٦﴾

16. Haddiise Alle imtixaano oo xoolaha ku yareeyo wuxuu dhihi Alle ayaa i dulleeyay.

كَلَّا ۖ بَل لَّا تُكْرِمُونَ ٱلْيَتِيمَ ﴿١٧﴾

17. Saas ma aha ee waxaydaan dhaqaalaynayn agoonka.

وَلَا تَحَٰٓضُّونَ عَلَىٰ طَعَامِ ٱلْمِسْكِينِ ﴿١٨﴾

18. Mana is fartaan in masaakiinta wax la siiyo.

وَتَأْكُلُونَ ٱلتُّرَاثَ أَكْلًا لَّمًّا ﴿١٩﴾

19. Waxaadna aad u cuntaan dhaxal xaq darro.

وَتُحِبُّونَ ٱلْمَالَ حُبًّا جَمًّا ﴿٢٠﴾

20. Xoolahana waxaad u jeceshihiin si daran.

كَلَّآ إِذَا دُكَّتِ ٱلْأَرْضُ دَكًّا دَكًّا ﴿٢١﴾

21. Saas ma aha ee marka dhulka la burburiyo burburin.

وَجَآءَ رَبُّكَ وَٱلْمَلَكُ صَفًّا صَفًّا ﴿٢٢﴾

22. Oo uu yimaado Alle, malaa'igtuna timaado iyadoo saf saf ah.

وَجِاْىٓءَ يَوْمَئِذٍۭ بِجَهَنَّمَ ۚ يَوْمَئِذٍ يَتَذَكَّرُ ٱلْإِنسَٰنُ وَأَنَّىٰ لَهُ ٱلذِّكْرَىٰ ﴿٢٣﴾

23. Naarta jahannamana maalintaas la keeno, dadku waxay xusuusan waxay faleen, maxayse xusuusi tari.

24. Waxay dhihi shallaytee maan wanaag hormarsado.
يَقُولُ يَٰلَيۡتَنِي قَدَّمۡتُ لِحَيَاتِي ﴿٢٤﴾

25. Maalintaas sida Alle wax ruux u cadaabi ma jiro.
فَيَوۡمَئِذٖ لَّا يُعَذِّبُ عَذَابَهُۥٓ أَحَدٞ ﴿٢٥﴾

26. Wax sida Alle wax u xidhina ma jiro.
وَلَا يُوثِقُ وَثَاقَهُۥٓ أَحَدٞ ﴿٢٦﴾

27. Naftase xaqa rumaysay ee xasillooneey.
يَٰٓأَيَّتُهَا ٱلنَّفۡسُ ٱلۡمُطۡمَئِنَّةُ ﴿٢٧﴾

28. U noqo Allehaa adoo raalli ah lagaana raalli noqday.
ٱرۡجِعِيٓ إِلَىٰ رَبِّكِ رَاضِيَةٗ مَّرۡضِيَّةٗ ﴿٢٨﴾

29. Dhexgalna addoommadayda (wanaagsan).
فَٱدۡخُلِي فِي عِبَٰدِي ﴿٢٩﴾

30. Galna jannadayda.
وَٱدۡخُلِي جَنَّتِي ﴿٣٠﴾

Xoola badnida iyo saboolnimaduba waa imtixaan Alle, mana aha jacayl Alle iyo nebcaansho midna, saas daraaddeed waa in wax bixinta lays faro, lana dhaqaaleeyo agoonta iyo masaakiinta, booli cuniddana layska jiro. Nabiguna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee): «guriga ugu khayr badan muslimiinta waa guriga agoon loogu sama falo, guriga ugu shar badan muslimiintana waa guri agoon lagu xumeeyo». Waxaa laga wariyay Cabdullaahi ibnu Mubaarak. Saa daraaddeed waa in wanaag la hor marsadaa si raalli ahaanshaha Alle iyo jannadiisa loo helo iyo naf xasilloon, illeen qiyaame iyo xisaabbaa dambaysee. **[Al-Fajr: 15-30].**

Suurat Al-Balad

سُورَةُ ٱلْبَلَدِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaan ku dhaaran magaalada (Makaad ee sharrifan).

لَآ أُقْسِمُ بِهَٰذَا ٱلْبَلَدِ ﴿١﴾

2. Ood Nabiyow daggan tahay dhexdeeda.

وَأَنتَ حِلٌّۢ بِهَٰذَا ٱلْبَلَدِ ﴿٢﴾

3. Iyo Nabi Aadam iyo carruurtiisa (oo laga wado dadka oo dhan).

وَوَالِدٍ وَمَا وَلَدَ ﴿٣﴾

4. Ee Alle dadka wuu abuuray iyagoo dhib iyo shaqo (adduunka kala kulmi).

لَقَدْ خَلَقْنَا ٱلْإِنسَٰنَ فِى كَبَدٍ ﴿٤﴾

5. Ma waxayse u maleeyeen inaan cidna awood ku lahayn (dadku).

أَيَحْسَبُ أَن لَّن يَقْدِرَ عَلَيْهِ أَحَدٌ ﴿٥﴾

6. Dadka (gaalada) waxay odhan waxaan bixiyey xoolo badan (si xaqa loo horjoogsado).

يَقُولُ أَهْلَكْتُ مَالًا لُّبَدًا ﴿٦﴾

7. Ma wuxuu u maleeyay (xaq diiduhu) inaan cidna arkaynin.

أَيَحْسَبُ أَن لَّمْ يَرَهُۥٓ أَحَدٌ ﴿٧﴾

8. Miyaannaan u yeelin laba indhood.

أَلَمْ نَجْعَل لَّهُۥ عَيْنَيْنِ ﴿٨﴾

9. Iyo carrab iyo laba bishimood.

وَلِسَانًا وَشَفَتَيْنِ ﴿٩﴾

10. Oo miyaannaan u caddaynin labada jid (khayrka iyo sharka).

وَهَدَيْنَٰهُ ٱلنَّجْدَيْنِ ﴿١٠﴾

Magaalada maka yuu Alle ku dhaartay, maxaa yeelay waa magaalo barakaysan quraankana lagu soo dajiyay, Nabigana laga bixiyay, kacbaduna ku taallo, saas darteed waa in la wayneeyo, addunkuna waa halgan iyo dhib, waase in xaqa la

raacaa loona adkaystaa, bixinta xooluhuna waa inay ahaataa dar Alle, maxaa yeelay Alle wuxuu inagu galladaystay nicmooyin badan, sida: indhaha, caqliga, afka, carrabka, iyo bishimaha, si aad wanaag ugu hadashid, waddadana Alle waa ina tusiyay, si aan jidka wanaagga u qaadno kan xunna uga leexanno.

Nabiguna wuxuu yidhi naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee: «baladkan Alle wuu xaaraam yeelay maalintuu abuuray samaawaadka iyo dhulka, waana xaaraam sida Alle u xarrimay ilaa qiyaamada, geedkiisa lama rujiyo, waxaase la ii banneeyay saacad maalin ka mid ah, iyaduna waxay ku noqotay xaaraamnimadeedii shalay oo kale, ha gaadhsiiyo midka jooga kan maqan». Waxaa wariyay Muslim iyo Bukhaari iyo kutubta sunnada ee kale. **[Al-Balad: 1-10].**

11. Ee dadku muu jiidho jiirta.	فَلَا ٱقْتَحَمَ ٱلْعَقَبَةَ ﴿١١﴾
12. Ma taqaannaa jiirta.	وَمَآ أَدْرَىٰكَ مَا ٱلْعَقَبَةُ ﴿١٢﴾
13. Waa qoor la xoreeyo.	فَكُّ رَقَبَةٍ ﴿١٣﴾
14. Iyo cunno la siiyo maalin gaajo.	أَوْ إِطْعَٰمٌ فِى يَوْمٍ ذِى مَسْغَبَةٍ ﴿١٤﴾
15. Agoon kuu dhaw.	يَتِيمًا ذَا مَقْرَبَةٍ ﴿١٥﴾
16. Ama miskiin dhulka ku dhagay (dhibaato darteed).	أَوْ مِسْكِينًا ذَا مَتْرَبَةٍ ﴿١٦﴾
17. Markaas la noqdo kuwa rumeeyay xaqa, isuna dardaarma samirka, isuna dardaarma naxariista.	ثُمَّ كَانَ مِنَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَتَوَاصَوْا۟ بِٱلصَّبْرِ وَتَوَاصَوْا۟ بِٱلْمَرْحَمَةِ ﴿١٧﴾
18. Kuwaasina waa kuwa midigta mari.	أُو۟لَٰٓئِكَ أَصْحَٰبُ ٱلْمَيْمَنَةِ ﴿١٨﴾
19. Kuwa ka gaaloobayse aayaadkannaga waa kuwa jidka xun mari.	وَٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَا هُمْ أَصْحَٰبُ ٱلْمَشْـَٔمَةِ ﴿١٩﴾
20. Waxaana lagu dabooli naar.	عَلَيْهِمْ نَارٌ مُّؤْصَدَةٌ ﴿٢٠﴾

Qiimaha noloshu waa in ruuxu halgamo xaqana raaco, dhibka halgankaasna u adkaysto, dadka tabaaleysan ee goommoonna wax ku taro, gaar ahaan agoonta iyo masaakiinta, si markaas ruuxu uga mid noqdo kuwa sama falay ee samirka iyo naxariista is fara, jidka wanaagsanna qaada xumaanna ka taga. Rasuulkuna wuxuu yidhi «naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee: «ruuxaan u naxariisannin kaannaga yar oqoonsanninna xaqa ka wayn, naga mid ma aha». Waxaa wariyay Abuu Daawuud. **[Al-Balad: 11-20].**

Suurat Ash-Shams

سُورَةُ الشَّمۡسِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Alle wuxuu ku dhaartay qorraxda iyo barqinkeeda.

وَٱلشَّمۡسِ وَضُحَىٰهَا ﴿١﴾

2. Iyo dayuxu markuu qorraxda raaco.

وَٱلۡقَمَرِ إِذَا تَلَىٰهَا ﴿٢﴾

3. Iyo maalintu markay ifiso (qorraxda).

وَٱلنَّهَارِ إِذَا جَلَّىٰهَا ﴿٣﴾

4. Iyo habeenku markuu daboolo (oo madoobaado).

وَٱلَّيۡلِ إِذَا يَغۡشَىٰهَا ﴿٤﴾

5. Iyo samada iyo say u dhisan tahay.

وَٱلسَّمَآءِ وَمَا بَنَىٰهَا ﴿٥﴾

6. Iyo dhulka iyo suu u fidsan yahay.

وَٱلۡأَرۡضِ وَمَا طَحَىٰهَا ﴿٦﴾

7. Iyo nafta iyo sida Alle u ekeeyay.

وَنَفۡسٖ وَمَا سَوَّىٰهَا ﴿٧﴾

8. Una tusiyay jidka xun iyo ka Alle ka yaabiddaba.

فَأَلۡهَمَهَا فُجُورَهَا وَتَقۡوَىٰهَا ﴿٨﴾

9. Ee waxaa liibaanay ruuxii naftiisa daahiriya.

قَدۡ أَفۡلَحَ مَن زَكَّىٰهَا ﴿٩﴾

10. Waxaana khasaaray ruuxii naftiisa xumaan dhex galiya.

وَقَدۡ خَابَ مَن دَسَّىٰهَا ﴿١٠﴾

11. Thamuud waxay beeniyeen (xaqii) kibir dartiiis.

كَذَّبَتۡ ثَمُودُ بِطَغۡوَىٰهَآ ﴿١١﴾

12. Markuu tagay koodii xumaa (si uu hasha u dilo).

إِذِ ٱنۢبَعَثَ أَشۡقَىٰهَا ﴿١٢﴾

13. Oo Rasuulkii Alle na ku yidhi, iska daaya hasha Alle iyo cabbiddeeda.

فَقَالَ لَهُمْ رَسُولُ ٱللَّهِ نَاقَةَ ٱللَّهِ وَسُقْيَٰهَا ﴿١٣﴾

14. Wayna beeniyeen rasuulkii hashiina way dileen markaasaa Alle si daran u caddibay dambigooda dartiis una simay ciqaabkii.

فَكَذَّبُوهُ فَعَقَرُوهَا فَدَمْدَمَ عَلَيْهِمْ رَبُّهُم بِذَنۢبِهِمْ فَسَوَّىٰهَا ﴿١٤﴾

15. Isagoon Alle ka yaabaynin cidhibteeda danbe (iyo wax yeello).

وَلَا يَخَافُ عُقْبَٰهَا ﴿١٥﴾

Alle wuxuu ku dhaartay todobo arrimood oo suuraddan ka mid ah, in ruuxii xaqa ku toosnaada uu liibaani, kii jidka xun qaadana uu khasaari, isla waynida dambiga, iyo xaq-diidnimaduna sabab u noqoto halaag iyo ciqaab. Rasuulkuna wuxuu yidhi «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee»: «ruux kastoo la dhalo waxaa lagu dhalaa fidrada (islaamka). Waxaa kale oo uu dhihi jiray isagoo sujuudsan: «Allow sii naftayda cabsideeda, daahirna yeel adaa u khayr badan ku wax daahiriyee, adigaa wali u ah sayidkeedana ah». Waxaa wariyay Imaam Axmed. **[Ash-Shams: 1-15].**

Suurat Al-Layl

سُورَةُ اللَّيۡلِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Alle wuxuu ku dhaartay habeenku markuu wax qariyo.

وَٱلَّيۡلِ إِذَا يَغۡشَىٰ ١

2. Iyo markay maalintu muuqato (ifto).

وَٱلنَّهَارِ إِذَا تَجَلَّىٰ ٢

3. Iyo abuuriddа dadka lab iyo dhaddigba.

وَمَا خَلَقَ ٱلذَّكَرَ وَٱلۡأُنثَىٰٓ ٣

4. In camalkiinnu (dadow) kala duwan yahay.

إِنَّ سَعۡيَكُمۡ لَشَتَّىٰ ٤

5. Ruuxiise bixiya (xuquuqda), Alle na ka dhawrsada.

فَأَمَّا مَنۡ أَعۡطَىٰ وَٱتَّقَىٰ ٥

6. Rumeeyana tii wanaagga badnayd (oo laga wado abaalmarinta wanaagsan).

وَصَدَّقَ بِٱلۡحُسۡنَىٰ ٦

7. Waxaannu u fududaynaa wanaagga (iyo jidka fiican).

فَسَنُيَسِّرُهُۥ لِلۡيُسۡرَىٰ ٧

8. Ruuxiise ku bakhayla xoolaha isna deeqtoonaysiiya (iskibriya).

وَأَمَّا مَنۢ بَخِلَ وَٱسۡتَغۡنَىٰ ٨

9. Beeniyana tii wanaagga badnayd (oo laga wado abaalmarinta wanaagsan).

وَكَذَّبَ بِٱلۡحُسۡنَىٰ ٩

10. Waxaan u fududaynaa jidka xun.

فَسَنُيَسِّرُهُۥ لِلۡعُسۡرَىٰ ١٠

11. Xoolihiisuna wax uma taraan markuu halaagsamo.

وَمَا يُغۡنِي عَنۡهُ مَالُهُۥٓ إِذَا تَرَدَّىٰٓ ١١

12. Annagaa wax hannuninna.
إِنَّ عَلَيْنَا لَلْهُدَىٰ ﴿١٢﴾

13. Aakhariyo addunbana annagaa iska leh.
وَإِنَّ لَنَا لَلْآخِرَةَ وَٱلْأُولَىٰ ﴿١٣﴾

14. Waxaana idiinka digayaa naar kulayl daran.
فَأَنذَرْتُكُمْ نَارًا تَلَظَّىٰ ﴿١٤﴾

15. Oosan galaynin ruux xun mooyeen.
لَا يَصْلَىٰهَآ إِلَّا ٱلْأَشْقَى ﴿١٥﴾

16. Oo xaqa beeniyay jeedsadayna.
ٱلَّذِى كَذَّبَ وَتَوَلَّىٰ ﴿١٦﴾

17. Waxaana ka fogaada (galidda naarta) ruuxii Alle ka dhawrsada.
وَسَيُجَنَّبُهَا ٱلْأَتْقَى ﴿١٧﴾

18. Ee bixiya xoolihiisa si uu u daahir noqdo.
ٱلَّذِى يُؤْتِى مَالَهُۥ يَتَزَكَّىٰ ﴿١٨﴾

19. Ruux wax ugu nicmeeyayna oo uu abaalmarinna ma uusan jirin.
وَمَا لِأَحَدٍ عِندَهُۥ مِن نِّعْمَةٍ تُجْزَىٰٓ ﴿١٩﴾

20. Ee wuxuu u bixin Rabbigiisa sarreeya dartii.
إِلَّا ٱبْتِغَآءَ وَجْهِ رَبِّهِ ٱلْأَعْلَىٰ ﴿٢٠﴾

21. Wuuna raalli noqon doonaa ruuxaasi.
وَلَسَوْفَ يَرْضَىٰ ﴿٢١﴾

Alle wuxuu ku dhaartay in camalka dadku kala duwan yahay, ruuxii toosana jidka wanaagsan loo fududayn, kii beeniya oo qalloocdana jid xun uu qaadi, aakhariyo adduunna Alle ayaa iska leh, ee waa in laga digtoonaado xumaanta, wanaagga iyo dar Alle wax u bixintana lugu dadaalo. Jaabir bini Cabdullaahi waxaa laga wariyay inuu yidhi: Rasuulkii Allow ma waxaan u camal-falaynaa amar la dhammeeyay mise amar aannu Cosboonayn? Markaasuu yidhi: «amar la dhammeeyay» markaasuu yidhi Suraaqo: camalku maxaa weeye marka? Rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) markaas wuxuu yidhi: «ruuxii camal-faliba waxaa loo fududayn camalkiisa». Waxaa wariyay Muslim. **[Al-Layl: 1-21].**

Suurat Ad-Duxaa

سُورَةُ الضُّحَىٰ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Alle wuxuu ku dhaartay barqinka.

وَٱلضُّحَىٰ ﴿١﴾

2. Iyo habeenku markuu xasilo (madoobaado).

وَٱلَّيْلِ إِذَا سَجَىٰ ﴿٢﴾

3. Inaan Alle kaa tagin Nabiyow kuuna cadhoonin.

مَا وَدَّعَكَ رَبُّكَ وَمَا قَلَىٰ ﴿٣﴾

4. Aakharaana kaaga khayr badan adduunka.

وَلَلْآخِرَةُ خَيْرٌ لَّكَ مِنَ ٱلْأُولَىٰ ﴿٤﴾

5. Rabbigaa ayaana ku siin doona (wanaag) waadna raalli noqon.

وَلَسَوْفَ يُعْطِيكَ رَبُّكَ فَتَرْضَىٰٓ ﴿٥﴾

6. Miyuusan ku helin Allehaa adigoo agoon ah oosan ku dhawaynin.

أَلَمْ يَجِدْكَ يَتِيمًا فَـَٔاوَىٰ ﴿٦﴾

7. Miyuunase ku helin adigoo ku sugan waxa maanta aad ku sugan tahay wax aan aheyn, oosan ku hanuuninnin.

وَوَجَدَكَ ضَآلًّا فَهَدَىٰ ﴿٧﴾

8. Miyuunase ku helin adigoo caydh ah oosna ku hodminin.

وَوَجَدَكَ عَآئِلًا فَأَغْنَىٰ ﴿٨﴾

9. Ee agoonta ha xoogin (hana dhibin).

فَأَمَّا ٱلْيَتِيمَ فَلَا تَقْهَرْ ﴿٩﴾

10. Ka wax su'aalina ha canaanan.
11. Nicmada Rabbigaana ka sheekee (ku mahadi).

وَأَمَّا ٱلسَّآئِلَ فَلَا تَنْهَرْ ﴿١٠﴾
وَأَمَّا بِنِعْمَةِ رَبِّكَ فَحَدِّثْ ﴿١١﴾

Suuraddani waa suurad wayn, sida suuradaha quraanka ee kalaba, waxayna ku soo dagtay mar Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) xanuunsaday gaaladuna dheheen Maxammad shaydaankiisii wuu ka tagay iyagoo ula jeeda malaku-Jibriil oo waxyiga dib ula yar dhacay, Alle na wuxuu suuradda ku sheegay nicmooyin uu Nabiga siiyay, iyo agoonka inaan la dhibin, kuwa dhibaataysanna ee wax warsanna aan la canaanan, nicmada Alle na lagu mahadiyo. Rasuulkuna wuxu yidhi naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee: «hodontinnimadu ma aha xoolo badni, laakin hodontinnimadu waa hodonnimada nafta». Waxaa wariyay Bukhaari iyo Muslim. **[Ad-Duxaa: 1-11].**

Suurat Ash-Sharx

سُورَةُ الشَّرۡحِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Miyaannaan kuu waasicinin laabta (kuu nuurinnin).

أَلَمۡ نَشۡرَحۡ لَكَ صَدۡرَكَ ﴿١﴾

2. Oonnaan kaa dajinnin culayskii.

وَوَضَعۡنَا عَنكَ وِزۡرَكَ ﴿٢﴾

3. Dhabarka kaa cusleeyay.

ٱلَّذِيٓ أَنقَضَ ظَهۡرَكَ ﴿٣﴾

4. Miyaannaan kor yeelin magacaaga (xusiddaada).

وَرَفَعۡنَا لَكَ ذِكۡرَكَ ﴿٤﴾

5. Cidhiidhina waxaa ku dhaw fudayd (iyo faraj)

فَإِنَّ مَعَ ٱلۡعُسۡرِ يُسۡرًا ﴿٥﴾

6. Cidhiidhina waxaa ku dhaw fudayd.

إِنَّ مَعَ ٱلۡعُسۡرِ يُسۡرًا ﴿٦﴾

7. Ee markaad salaadda dhammayso isku dhib (samo fal).

فَإِذَا فَرَغۡتَ فَٱنصَبۡ ﴿٧﴾

8. Alle na (khayr) ka rajee.

وَإِلَىٰ رَبِّكَ فَٱرۡغَب ﴿٨﴾

Alle wuxuu Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) ku mannaystay wanaag badan, sida laabta oo loo nuuray, culayska oo laga dajiyay, iyo magaciisa oo la kor yeelay, wuxuuna Alle sheegay in cidhiidhi kasta faraj ku dhaw yahay, wuxuuna faray in ducada iyo khayrkana lagu dadaalo, Alle na wanaag laga rajeeyo. Qataada waxaa laga wariyay in loo sheegay in Rasuulkii Alle, «naxariis iyo nabadgalyo Alle korkiisa ha yeelee» asaxaabtiisii ugu bishaareeyay aayaddan yidhina: «hal cidhiidhi kama adkaado laba fudayd». Waxaa wariyay Ibnu Jariir. **[Ash-Sharx: 1-8].**

Suurat At-Tiin

سُورَةُ التِّينِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Alle wuxuu ku dhaartay tiinka iyo zeytuunka.

وَٱلتِّينِ وَٱلزَّيْتُونِ ﴿١﴾

2. Iyo Duuri Siina.

وَطُورِ سِينِينَ ﴿٢﴾

3. Iyo magaaladan aaminka ah (Maka)

وَهَٰذَا ٱلْبَلَدِ ٱلْأَمِينِ ﴿٣﴾

4. Ee waxaan ku abuurray dadka muuqaal toosan.

لَقَدْ خَلَقْنَا ٱلْإِنسَٰنَ فِىٓ أَحْسَنِ تَقْوِيمٍ ﴿٤﴾

5. Kaddibna waxaan u celinaynaa kuwa hooseeya midka ugu hooseeya (gabow dartiis).

ثُمَّ رَدَدْنَٰهُ أَسْفَلَ سَٰفِلِينَ ﴿٥﴾

6. Hase yeeshee kuwa rumeeyey xaqa camalwanaagsanna falay, waxay mudan ajri aan go'aynin.

إِلَّا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ فَلَهُمْ أَجْرٌ غَيْرُ مَمْنُونٍ ﴿٦﴾

7. Ee maxaa kuu sababay in aad beeniso qiyaamada intaas ka dib.

فَمَا يُكَذِّبُكَ بَعْدُ بِٱلدِّينِ ﴿٧﴾

8. Miyuusan Alle ahayn kan ugu xukun wanaagsan. (Alle ayaa xukun wanaagsan).

أَلَيْسَ ٱللَّهُ بِأَحْكَمِ ٱلْحَٰكِمِينَ ﴿٨﴾

Suuraddani waxay ka warrami sida Alle u abuuray dadka, una wanaajiyey abuurkiisa, hadana ugu celin gabow iyo tabar yari ciddii cimrida, Alle na wuxuu ku abaal marin kuwa wanaagga falay wanaag iyo ajiraan dhamaanayn, Alle na waa kan xukunkiisu caadilka iyo xaqa yahay uguna fiican yahay.

Abuu Hureere waxaa laga wariyey: hadduu mid idinka mid ah akhriyo suuraddan iyo dhamaadkeeda ha yiraahdo: waxaan ka mid ahay kuwa marag furi. **[At-Tiin: 1-8].**

Suurat Al-Calaq

سُورَةُ ٱلْعَلَقِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Wax ku akhri Nabiyow magaca Alle ee abuuray (khalqiga).

ٱقْرَأْ بِٱسْمِ رَبِّكَ ٱلَّذِى خَلَقَ ﴿١﴾

2. Dadkana ka abuuray calaq (dhiig guntamay oo adkaaday).

خَلَقَ ٱلْإِنسَٰنَ مِنْ عَلَقٍ ﴿٢﴾

3. Akhri Alle na waa kan sharafta lehe.

ٱقْرَأْ وَرَبُّكَ ٱلْأَكْرَمُ ﴿٣﴾

4. Ee dadka baray sida qalinka wax loogu qoro.

ٱلَّذِى عَلَّمَ بِٱلْقَلَمِ ﴿٤﴾

5. Dadkana baray waxayna aqoonnin.

عَلَّمَ ٱلْإِنسَٰنَ مَا لَمْ يَعْلَمْ ﴿٥﴾

6. Saas ma aha ee dadku (gaaladu) waa xadgudbeen.

كَلَّآ إِنَّ ٱلْإِنسَٰنَ لَيَطْغَىٰٓ ﴿٦﴾

7. Markuu isku ogaaday hodontinnimo.

أَن رَّءَاهُ ٱسْتَغْنَىٰٓ ﴿٧﴾

8. Allehaa xaggiisaase loo noqon.

إِنَّ إِلَىٰ رَبِّكَ ٱلرُّجْعَىٰٓ ﴿٨﴾

9. Ka warrama midka ka reebaya.

أَرَءَيْتَ ٱلَّذِى يَنْهَىٰ ﴿٩﴾

10. Addoon (Alle) oo tukan salaadda.

عَبْدًا إِذَا صَلَّىٰٓ ﴿١٠﴾

11. Bal ka warrama hadduu ka laga reebi hanuunsan yahay (waa Nabiga).

أَرَءَيْتَ إِن كَانَ عَلَى ٱلْهُدَىٰٓ ﴿١١﴾

12. Ama uu fari Alle ka yaabid.
13. Balse ka warrama hadduu midka wax ka reebi uu beeniyay (xaqa) kana jeedsaday (waa Abuujahal iyo wixii la mid ahe).
14. Miyuusan ogayn in Alle arko.
15. Saas ma aha ee hadduusan joogin waxaannu qaban foodda.
16. Food beenaaleey ah gafna badan.
17. Ha u yeedho gargaarihiisa.
18. Waxaannu u yeedhi malaa'ig darane.
19. Saas ma aha ee warkiisa ha maqlin, sujuudna, una dhawow (Alle).

أَوْ أَمَرَ بِٱلتَّقْوَىٰٓ ﴿١٢﴾
أَرَءَيْتَ إِن كَذَّبَ وَتَوَلَّىٰٓ ﴿١٣﴾
أَلَمْ يَعْلَم بِأَنَّ ٱللَّهَ يَرَىٰ ﴿١٤﴾
كَلَّا لَئِن لَّمْ يَنتَهِ لَنَسْفَعًۢا بِٱلنَّاصِيَةِ ﴿١٥﴾
نَاصِيَةٍ كَٰذِبَةٍ خَاطِئَةٍ ﴿١٦﴾
فَلْيَدْعُ نَادِيَهُۥ ﴿١٧﴾
سَنَدْعُ ٱلزَّبَانِيَةَ ﴿١٨﴾
كَلَّا لَا تُطِعْهُ وَٱسْجُدْ وَٱقْتَرِب ۩ ﴿١٩﴾

Suuraddani waa suuraddii quraanka u soo hor dagtay, waxayna ku billaabatay faridda wax barashada iyo qalinka, taasoo ku tusin sida diinta islaamku ugu horrayso wax barashada iyo la dagaallanka jahliga, waxaa kalooy ku tusin xumaanta isla waynida iyo dadka oo xaqa laga reebo, iyo inaan la maqlin xumaanle warkiis ee Alle lagu xidhnaado illeen isagaa xoog iyo awoodba leh. Abuu-Hurayra waxa laga wariyay in Rasuulkii Alle «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee» yidhi: «addoonku wuxuu Allehiis ugu dhaw yahay markuu sujuudsan yahay ee badiya ducada.» Waxaa wariyay Muslim. **[Al-Calaq: 1-19].**

Suurat Al-Qadr

سُورَةُ ٱلْقَدْرِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

إِنَّآ أَنزَلْنَٰهُ فِى لَيْلَةِ ٱلْقَدْرِ ﴿١﴾

1. Annagaa soo dajinnay quraanka habeen laylatul qadar ah (sharaf leh).

وَمَآ أَدْرَىٰكَ مَا لَيْلَةُ ٱلْقَدْرِ ﴿٢﴾

2. Ma taqaannaa laylatul qadarka.

لَيْلَةُ ٱلْقَدْرِ خَيْرٌ مِّنْ أَلْفِ شَهْرٍ ﴿٣﴾

3. Waa habeen ka khayr badan kun bilood (oo kale).

تَنَزَّلُ ٱلْمَلَٰٓئِكَةُ وَٱلرُّوحُ فِيهَا بِإِذْنِ رَبِّهِم مِّن كُلِّ أَمْرٍ ﴿٤﴾

4. Waxaana soo daga malaa'igta (kale) iyo malaku Jibriil habeenkaas, idanka Alle dartiis iyo amarkiisa.

سَلَٰمٌ هِىَ حَتَّىٰ مَطْلَعِ ٱلْفَجْرِ ﴿٥﴾

5. Waana habeen nabadgalyo inta waagu ka baryi.

Wuxuu Alle innoogu sheegay suuraddan inuu quraanka sharafta leh soo dajiyay habeenkaa wanaagsan ee ka khayr badan kun bilood, waxaana la sheegay in habeenkaasi ku jiro bisha barakaysan ee soon. Saas daraadded mar hadduu yahay habeen sharaf leh malaa'igtuna soo dagi habeen nabadgalyana yahay, waa in lagu dadaalaa sidii loo heli lahaa wanaaggana la badiyo xumaantana la yareeyo. Abuuhurayra waxaa laga wariyay in Rasuulkii Alle «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee» uu yidhi: «ruuxii istaaga laylatu-qadarka «salaad» rumayn iyo ajri doonid darteed waa loo dhaafaa wixii hormary oo dambigiisa ah» waxaa wariyay Bukhaari iyo Muslim. **[Al-Qadr: 1-5].**

Suurat Al-Bayyinah

سُورَةُ ٱلْبَيِّنَةِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

لَمْ يَكُنِ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ مِنْ أَهْلِ ٱلْكِتَٰبِ وَٱلْمُشْرِكِينَ مُنفَكِّينَ حَتَّىٰ تَأْتِيَهُمُ ٱلْبَيِّنَةُ ﴿١﴾

1. Ma aha kuwii gaaloobay ee ahaa ehlu kitaabka (yahuud iyo nasaara) iyo gaaladii kuwo ka taga (xumaanta) intuu uga yimaaddo wax cad (xuja ah).

رَسُولٌ مِّنَ ٱللَّهِ يَتْلُواْ صُحُفًا مُّطَهَّرَةً ﴿٢﴾

2. Oo ah Rasuul Alle oo akhriyi kutub daahir ah.

فِيهَا كُتُبٌ قَيِّمَةٌ ﴿٣﴾

3. Oo xukun fiicani ku yaal.

وَمَا تَفَرَّقَ ٱلَّذِينَ أُوتُواْ ٱلْكِتَٰبَ إِلَّا مِنۢ بَعْدِ مَا جَآءَتْهُمُ ٱلْبَيِّنَةُ ﴿٤﴾

4. Mana kala tagin gaalada ehlu kitaabka ah intuu uga yimaaddo xaq cad (xasad dartiis).

وَمَآ أُمِرُوٓاْ إِلَّا لِيَعْبُدُواْ ٱللَّهَ مُخْلِصِينَ لَهُ ٱلدِّينَ حُنَفَآءَ وَيُقِيمُواْ ٱلصَّلَوٰةَ وَيُؤْتُواْ ٱلزَّكَوٰةَ ۚ وَذَٰلِكَ دِينُ ٱلْقَيِّمَةِ ﴿٥﴾

5. Dadkana waxaan Alle caabudiddiisa ahayn lama farin iyagoo u kali yeeli Alle diinta, toosanna, salaaddana oogi, zakadana bixin, saasina waa diinta toosan.

إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ مِنْ أَهْلِ ٱلْكِتَٰبِ وَٱلْمُشْرِكِينَ فِى نَارِ جَهَنَّمَ خَٰلِدِينَ فِيهَآ ۚ أُوْلَٰٓئِكَ هُمْ شَرُّ ٱلْبَرِيَّةِ ﴿٦﴾

6. Kuwa gaaloobay oo ehlu kitaabka ah iyo gaaladii waxay gali naarta jahannama ayna ku waari dhexdeeda, kuwaasina waa kuwa ugu shar badan khalqiga.

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ
أُوْلَٰٓئِكَ هُمۡ خَيۡرُ ٱلۡبَرِيَّةِ ٧

7. Kuwa rumeeyayse xaqa camal fiicanna falay kuwaasi waa kuwa ugu khayr badan khalqiga.

جَزَآؤُهُمۡ عِندَ رَبِّهِمۡ جَنَّٰتُ عَدۡنٖ
تَجۡرِي مِن تَحۡتِهَا ٱلۡأَنۡهَٰرُ خَٰلِدِينَ
فِيهَآ أَبَدٗاۖ رَّضِيَ ٱللَّهُ عَنۡهُمۡ وَرَضُواْ
عَنۡهُۚ ذَٰلِكَ لِمَنۡ خَشِيَ رَبَّهُۥ ٨

8. Abaalkooda ay Alle agtiisa ku leeyihiin waa jannooyin nagaadi, dhexdeedana ay dureeri wabiyaal ay kuna waari dhexdeeda waligood, Alle ayaa ka raalli noqday iyana way ka raalli noqdeen, arrintaasna waxay u sugnaatay ruuxii Rabbi ka yaaba.

Suuraddu waxay sheegi xumaanta gaalada iyo inay Nabiga, quraanka iyo xaqaba diidi xasad, kibir iyo xaq diidnimo, hase yeeshee diintu iyo wanaaggeeduba waa cad yihiin sida maalintoo kale, dadkuna waa laba, mu'min khayr badan oo janna gali, iyo gaal shar badan iyo xumaan oo naar gali (Alle hanaga koriyee). Nabiguna wuxuu yidhi «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee»: «yahuudi waxay u kala tagtay kow iyo toddobaatan qaybood, nasaarana waxay u kala tageen laba iyo toddobaatan qaybood, ummaddanna waxay u kala tagi saddex iyo toddobaatan qaybood, dhammaanna naartay gali mid mooyeene» waxay dheheen: waa tee Rasuulkii Allow? Wuxuu yidhi: «waa tan ku socota saan nahay ani iyo asxaabtayda». **[Al-Bayyinah: 1-8].**

Suurat Az-Zalzalah

سُورَةُ الزَّلْزَلَةِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Marka dhulka (arladi) la gilgilo gilgiliddeedi.

إِذَا زُلْزِلَتِ ٱلْأَرْضُ زِلْزَالَهَا ﴿١﴾

2. Arladuna soo bixiso culayskeedii (wixii ku aasnaa).

وَأَخْرَجَتِ ٱلْأَرْضُ أَثْقَالَهَا ﴿٢﴾

3. Dadkuna (gaaladuna) dhahaan maxay leedahay.

وَقَالَ ٱلْإِنسَٰنُ مَا لَهَا ﴿٣﴾

4. Maalintaas waxay ka sheekayn warkeeda.

يَوْمَئِذٍ تُحَدِّثُ أَخْبَارَهَا ﴿٤﴾

5. Maxaa yeelay Alle ayaa u waxyooday.

بِأَنَّ رَبَّكَ أَوْحَىٰ لَهَا ﴿٥﴾

6. Maalintaas dadku way soo bixi iyagoo kala tagsan (xagga diinta iyo camalkaba) si loo tusiyo abaalka camalkooda.

يَوْمَئِذٍ يَصْدُرُ ٱلنَّاسُ أَشْتَاتًا لِّيُرَوْا۟ أَعْمَٰلَهُمْ ﴿٦﴾

7. Ruuxiise wax yaroo khayra fala wuu arki.

فَمَن يَعْمَلْ مِثْقَالَ ذَرَّةٍ خَيْرًا يَرَهُۥ ﴿٧﴾

8. Kiise wax yar oo shar ah fala wuu arki.

وَمَن يَعْمَلْ مِثْقَالَ ذَرَّةٍ شَرًّا يَرَهُۥ ﴿٨﴾

Qiyaamadu waa xaq sugan si ruux walba looga abaal mariyo camalkiisa, khayr ruuxii fala wuu la kulmi, xumaan yar ruuxii sameeyana wuu arki, ruux walbana suu ka diin yeesho yaa lugu abaal marin. Abuu Hurayra waxaa laga wariyay inuu yidhi: Rasuulkii Alle «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee» yaa akhriyay aayaddan: (maalintaas waxay ka sheekayn warkeeda) wuxuuna yidhi: «ma ogtihiin warkeeda? » Waxay dheheen Alle iyo Rasuulkiisaa og, wuxuu yidhi: «warkeedu waa inay ku marag kacdo addoon kastaba wuxuu ku camal falay korkeeda, iyadoo dhihi: wuxuu camal falay sidaa iyo sidaa, maalin hebla iyo maalin hebla, warkeedu wakaas». Waxaa wariyay Axmad iyo Tirmidi iyo Nasaa'i. **[Az-Zalzalah: 1-8].**

Suurat Al-Caadiyaat

سُورَةُ العَادِيَاتِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Alle wuxuu ku dhaartay fardaha jihaadka u orda iyagoo feeraha ka qaylyi.

وَٱلْعَٰدِيَٰتِ ضَبْحًا ﴿١﴾

2. Iyo kuwa dabka qoobkooda ku ifiya (guuraha).

فَٱلْمُورِيَٰتِ قَدْحًا ﴿٢﴾

3. Iyo kuwa cadawga weerara subaxdii.

فَٱلْمُغِيرَٰتِ صُبْحًا ﴿٣﴾

4. Ee boodhka kiciya.

فَأَثَرْنَ بِهِۦ نَقْعًا ﴿٤﴾

5. Cadawgana dhexgala.

فَوَسَطْنَ بِهِۦ جَمْعًا ﴿٥﴾

6. Ee dadku Rabbigood waa diideen.

إِنَّ ٱلْإِنسَٰنَ لِرَبِّهِۦ لَكَنُودٌ ﴿٦﴾

7. Arrintaasna dadku wuu og yahay.

وَإِنَّهُۥ عَلَىٰ ذَٰلِكَ لَشَهِيدٌ ﴿٧﴾

8. Dadkuna xoola jacaylka waa ku daran yahay.

وَإِنَّهُۥ لِحُبِّ ٱلْخَيْرِ لَشَدِيدٌ ﴿٨﴾

9. Miyuuna ogayn marka xabaalaha waxa ku jira la soo bixiyo.

۞ أَفَلَا يَعْلَمُ إِذَا بُعْثِرَ مَا فِى ٱلْقُبُورِ ﴿٩﴾

10. Laabaha waxa ku qarsoonna la muujiyo.

وَحُصِّلَ مَا فِى ٱلصُّدُورِ ﴿١٠﴾

11. In Rabbigood maalintaas ayaga u ogaal badan yahay.

إِنَّ رَبَّهُم بِهِمْ يَوْمَئِذٍ لَّخَبِيرٌۢ ﴿١١﴾

Jihaadka gaaladu waa arrin wayn oo waajib ah, kaasoo ah in loo darbado wax kasta oo qalab ah, qiimaha arrintaasna waxaa ku tusin in Alle ku dhaartay. Waxaa kale oy suuraddu ina tusin madax adaygga dadka iyo xoola jacaylkiisa, marse haddii qiyaame la iman, qalbiga wixii ku qarsoonaana la muujin Alle na wax walba ogyahay, soo in loo darbado khayrkana la badiyo ma habboona. **[Al-Caadiyaat: 1-11].**

Suurat Al-Qaaricah

سُورَةُ ٱلْقَارِعَةِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Qaaricada (qalbiga garaacda).
ٱلْقَارِعَةُ ﴿١﴾

2. Qaarica maxay tahay.
مَا ٱلْقَارِعَةُ ﴿٢﴾

3. Mase taqaannaa qaarico.
وَمَآ أَدْرَىٰكَ مَا ٱلْقَارِعَةُ ﴿٣﴾

4. Waa maalinta dadku noqon sida baalallay faafsan.
يَوْمَ يَكُونُ ٱلنَّاسُ كَٱلْفَرَاشِ ٱلْمَبْثُوثِ ﴿٤﴾

5. Buuruhuna ay noqon sida suuf kala firdhay.
وَتَكُونُ ٱلْجِبَالُ كَٱلْعِهْنِ ٱلْمَنفُوشِ ﴿٥﴾

6. Ruuxiise miisaankiisa (fiican) cuslaado.
فَأَمَّا مَن ثَقُلَتْ مَوَٰزِينُهُۥ ﴿٦﴾

7. Wuxuu ku noolaan nolol laga raalli yahay.
فَهُوَ فِى عِيشَةٍ رَّاضِيَةٍ ﴿٧﴾

8. Ruuxiise uu fududaado miisaankiisa (fiican).
وَأَمَّا مَنْ خَفَّتْ مَوَٰزِينُهُۥ ﴿٨﴾

9. Wuxuu u hoydaa (naarta) haawiya (oo uu madax madax ugu hooban).
فَأُمُّهُۥ هَاوِيَةٌ ﴿٩﴾

10. Ma taqaannaa haawiya.
وَمَآ أَدْرَىٰكَ مَا هِيَهْ ﴿١٠﴾

11. Waa naar kulayl daran.
نَارٌ حَامِيَةٌۢ ﴿١١﴾

Maalinta qiyaame magacya badan bay leedahay, waxayna ku tusin waynideeda siduu yidhi Cali binu Abii Daalib: magacyada badan waxay ku tusin waynida

ka leh. Waana maalin miisaan caddaalad la taagi, ruux walbana uu la kulmi wuxuu hormarsaday, oo ah abaal-marin janno wanaagsan, ama naar kulayl badan. Rasuulkii Alle na wuxuu yidhi naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee: «naartiibaa u dacwootay Rabbigeed iyadoo leh: Allow qaarkaybaa qaar cunay, markaasuu u idmay laba neefsasho, mid qabowga ah iyo mid kulaylka ah, waana qabowga u daran eed heshaan xagaagii, iyo kulaylka u daran eed heshaan jiilaalkii». Waxaa wariyay Bukhaari iyo Muslim. **[Al-Qaaricah: 1-11].**

Suurat At-Takaathur

سُورَةُ التَّكَاثُرِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaa idin shuqliyay dadow waxbadsasho (iyo isu faanid).

أَلْهَىٰكُمُ ٱلتَّكَاثُرُ ﴿١﴾

2. Intaad xabaalaha ka tagtaan (dhimataan).

حَتَّىٰ زُرْتُمُ ٱلْمَقَابِرَ ﴿٢﴾

3. Saas ma aha ee waad ogaan doontaan.

كَلَّا سَوْفَ تَعْلَمُونَ ﴿٣﴾

4. Haddana saas ma ehee waad ogaan doontaan (faanka cidhibtiisa).

ثُمَّ كَلَّا سَوْفَ تَعْلَمُونَ ﴿٤﴾

5. Haddaad dhab ahaan wax u ogtihiin (waad dayn lahaydeen xumaanta).

كَلَّا لَوْ تَعْلَمُونَ عِلْمَ ٱلْيَقِينِ ﴿٥﴾

6. Dhab ahaan baad u arkaysaan (naarta) jaxiima.

لَتَرَوُنَّ ٱلْجَحِيمَ ﴿٦﴾

7. Ka dibna waxaad u arkaysaan naartaas si yaqiin ah.

ثُمَّ لَتَرَوُنَّهَا عَيْنَ ٱلْيَقِينِ ﴿٧﴾

8. Waxaana laydin warsan maalintaas nicmadii.

ثُمَّ لَتُسْـَٔلُنَّ يَوْمَئِذٍ عَنِ ٱلنَّعِيمِ ﴿٨﴾

Faan iyo isla wayni wax qiima ah ma leh, waxaana lagala kulmaa cidhibxumo iyo khasaare, marse haddii la dhiman dhab-ahaanna wax loo arki doono, nicmadii addunyana lays waydiin doono waa in wanaag la hormarsadaa, xoolo iyo dad isugu faanna laga tagaa, xooluhu maxay tari haddaan wanaag loo hormarsannin. Rasuulkii Alle na wuxuu yidhi «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee»: maydka waxaa raaca saddex, laba way soo noqon midna wuu la jiraa: waxaa raaci ehelkiisa, maalkiisa iyo camalkiisa, waxaa soo noqon ehelkiisii iyo maalkiisii, waxaana ku hadhi camalkiisii. Waxaa wariyay Bukhaari, Muslim iyo Tirmidi. **[At-Takaathur: 1-8].**

Suurat Al-Casr

سُورَةُ ٱلْعَصْرِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Alle wuxuu ku dhaartay waqtiga casarka ah.

وَٱلْعَصْرِ ﴿١﴾

2. In dadku khasaaro ku sugan yahay.

إِنَّ ٱلْإِنسَٰنَ لَفِى خُسْرٍ ﴿٢﴾

3. Marka laga reebo kuwa rumeeyay xaqa ee camal fiican falay, isuna dardaarmay xaqa, isuna dardaarmay samirka.

إِلَّا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ وَتَوَاصَوْا۟ بِٱلْحَقِّ وَتَوَاصَوْا۟ بِٱلصَّبْرِ ﴿٣﴾

Suuraddani waa suurad gaaban, hase yeeshee aad u wayn, waxayna caddaysay in dadku khasaaray wixii ka soo hadhay kuwa xaqa rumeeyay camal wanaagsanna la yimid, wanaaggana is faray, samirkana isu dardaarmay. Dabaraani wuxuu ka wariyay Cubaydullaahi binu Xafse inuu yidhi: laba ruux oo asxaabtii Rasuulka ka mid ah waxay ahaayeen hadday kulmaan inaynan kala tagin isagoon midkood akhriyin suuraddan ilaa dhammadkeeda markaasay isa salaami jireen. Imaamu Shaaficina wuxuu yidhi Alle ha ka raali noqdee: dadku hadday suuraddan fiiriyaan way u waasac noqon lahayd (ku fillaan lahayd). **[Al-Casr: 1-3].**

Suurat Al-Humazah

سُورَةُ الهُمَزَة

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Halaag wuxuu u sugnaaday xanle wax ceebeeya oo dhan.

وَيْلٌ لِّكُلِّ هُمَزَةٍ لُّمَزَةٍ ﴿١﴾

2. Oo xoolaha kulmiya (xaqana ku bixinnin).

ٱلَّذِى جَمَعَ مَالًا وَعَدَّدَهُۥ ﴿٢﴾

3. Wuxuu u malayn in xoolihiisu waarin.

يَحْسَبُ أَنَّ مَالَهُۥٓ أَخْلَدَهُۥ ﴿٣﴾

4. Saas ma aha ee waxaa lagu tuuri (naarta) xudama.

كَلَّا لَيُنۢبَذَنَّ فِى ٱلْحُطَمَةِ ﴿٤﴾

5. Ma taqaannaa xudama.

وَمَآ أَدْرَىٰكَ مَا ٱلْحُطَمَةُ ﴿٥﴾

6. Waa naarta Alle ee la huriyay.

نَارُ ٱللَّهِ ٱلْمُوقَدَةُ ﴿٦﴾

7. Gubaysana quluubta (kulayl dartiis).

ٱلَّتِى تَطَّلِعُ عَلَى ٱلْأَفْـِٔدَةِ ﴿٧﴾

8. Waana lagu dabooli naartaas gaalada.

إِنَّهَا عَلَيْهِم مُّؤْصَدَةٌ ﴿٨﴾

9. Tiirar la fidiyay yayna ahaan dhexdeeda.

فِى عَمَدٍ مُّمَدَّدَةٍۭ ﴿٩﴾

Xanta, dadkoo la xaqiro oo la yaso, xoolahoo la kulmiyo oon xaqa lagu bixinin waa arrimo xun ruuxii ku kacana sabab ugu noqota naar galiddeed, saa daraaddeed waa in layska jiraa xumaanaha la soo sheegay, illeen xan wax kuuma qabato, xoolana kuma waariyaan. **[Al-Humazah: 1-9].**

Suurat Al-Fiil

سُورَةُ الفِيلِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Ma ogtahay sida Rabbigaa ku falay asaxaabtii maroodiga «colkii».

أَلَمْ تَرَ كَيْفَ فَعَلَ رَبُّكَ بِأَصْحَٰبِ ٱلْفِيلِ ﴿١﴾

2. Miyaan Alle ka yeelin dhagartoodii wax dhumay.

أَلَمْ يَجْعَلْ كَيْدَهُمْ فِى تَضْلِيلٍ ﴿٢﴾

3. Oosan ku dirin korkooda shimbiro kooxa ah.

وَأَرْسَلَ عَلَيْهِمْ طَيْرًا أَبَابِيلَ ﴿٣﴾

4. Kuna tuuraysa dhagaxyo la kululeeyay.

تَرْمِيهِم بِحِجَارَةٍ مِّن سِجِّيلٍ ﴿٤﴾

5. Markaas Alle ka yeelay bal la daaqay sidiis.

فَجَعَلَهُمْ كَعَصْفٍ مَّأْكُولٍ ﴿٥﴾

Suuraddani waxay ka warrami arrin dhacday Nabiga dhalashaddiisii wax yar ka hor, (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee) oo ah in gaal xabashi ah yaman ka soo duulay si uu u soo dumiyo kacbada sharafta leh, markuu Maka ku soo dhawyahayna Alle ku sii daayay shimbiro dhagaxyo ku tuuri colkiina saa ku jabay, kacbadiina nabadgashay. Arrintaasu la yaab ma leh, maxaa yeelay Alle isagaa awood leh, immisayse dhacday wax shimbiro ka yar intay wax halaageen. **[Al-Fiil: 1-5].**

Suurat Quraysh

سُورَةُ قُرَيۡشٍ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Caadaysigii qureesheed.

لِإِيلَٰفِ قُرَيۡشٍ ﴿١﴾

2. Ay ka caada yeesheen safarka xagaaga iyo jiilaalka darteed.

إِۦلَٰفِهِمۡ رِحۡلَةَ ٱلشِّتَآءِ وَٱلصَّيۡفِ ﴿٢﴾

3. Ha u caabudeen Rabbiga beydkan (kacbada).

فَلۡيَعۡبُدُواْ رَبَّ هَٰذَا ٱلۡبَيۡتِ ﴿٣﴾

4. Allihii ka quudiyay gaajo, kana aammin galiyay cabsi.

ٱلَّذِيٓ أَطۡعَمَهُم مِّن جُوعٖ وَءَامَنَهُم مِّنۡ خَوۡفِۢ ﴿٤﴾

Alle isagaa abuuray dadka isagaana quudiya, halkanna wuxuu ku mannaystay oo xusuusiyay qurayshtii reer Makaad siduu Alle ugu nicmeeyay, taasoo ah inuu kulmiyay, baahina ka quudiyay, cabsina ka nabadgaliyay, si ay Alle ugu mahad-naqaanna ay waajib tahay inay caabudaan, ruuxii Alle u nicmeeyana shukrigeedaa ku waajib ah. Rasuulkii Alle na «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee» wuxuu akhriyay suuraddan markaasuu yidhi: magaciin ba' qureysheey caabuda Rabbiga beydkan, idinka quudiyay gaajo, idinkana aammin yeelay cabsi. **[Quraysh: 1-4].**

Suurat Al-Maacuun

سُورَةُ الْمَاعُونِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Ka warrama kan beenin abaalmarinta (qiyaamada).

أَرَءَيْتَ ٱلَّذِى يُكَذِّبُ بِٱلدِّينِ ﴿١﴾

2. Kaas xooga agoonta (xaqeeda).

فَذَٰلِكَ ٱلَّذِى يَدُعُّ ٱلْيَتِيمَ ﴿٢﴾

3. Aan kuna boorrinaynin quudinta miskiinka.

وَلَا يَحُضُّ عَلَىٰ طَعَامِ ٱلْمِسْكِينِ ﴿٣﴾

4. Waxaa halaag u sugnaaday kuwa tukan (waa munaafiqiinta).

فَوَيْلٌ لِّلْمُصَلِّينَ ﴿٤﴾

5. Ee haddana halmaansan salaaddooda (oon waqtigeeda ku tukan).

ٱلَّذِينَ هُمْ عَن صَلَاتِهِمْ سَاهُونَ ﴿٥﴾

6. Dadkana is tusiya.

ٱلَّذِينَ هُمْ يُرَآءُونَ ﴿٦﴾

7. Una diida alaabta (laysugu kaalmeeyo).

وَيَمْنَعُونَ ٱلْمَاعُونَ ﴿٧﴾

Abaalmarinta oo la beeniyo, agoontoo la dhibo, masaakiintoon wax lagu sadaqaysanin, salaaddoo layska hilmaamo, dadkoo lays tustusiyo iyo weelasha iyo kaalmadoo la ceshado waa arrimo xun xun oyna wanaagsanayn in loo dhawaado. Rasuulkii Alle na wuxuu yidhi «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee»: «ruuxii dadka maqashiiya camalkiisa Alle na wuxuu maqashiiyaa khalqigiisa wuuna xaqiraa wuuna yareeyaa» waxaa wariyay Imaam Axmad. **[Al-Maacuun: 1-7].**

Suurat Al-Kawthar

سُورَةُ الكَوثَر

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Annagaa ku siinnay Nabiyow waadi janno (iyo khayr badan).

إِنَّآ أَعْطَيْنَٰكَ ٱلْكَوْثَرَ ﴿١﴾

2. Ee u tuko Allehaa dartiis, waxna u gawrac.

فَصَلِّ لِرَبِّكَ وَٱنْحَرْ ﴿٢﴾

3. Ruuxii ku necebna waa mid cidhib beelay.

إِنَّ شَانِئَكَ هُوَ ٱلْأَبْتَرُ ﴿٣﴾

Alle wuxuu ugu nicmeeyay Nabigiisa Muxammad ah «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee» waadi janno, wuxuuna faray in shukri dartiis uu u tukado salaaddana daa'imo, waxna gawraco, wuxuuna u sheegay in ruuxii la collooba uu cidhib-beeli. Ibnu-Cumar wuxuu yidhi: waxaa Alle Nabiga siiyay wabi ku yaal jannada oo labadiisa dhinac dahab iyo fiddo yihiin, oo jowhar daadin, biyihiisuna ka cad yihiin caano, kana macaan yihiin malab. Waxaa wariyay Tirmidi. **[Al-Kawthar: 1-3].**

Suurat Al-Kaafiruun

سُورَةُ الكَافِرُونَ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaad dhahdaa, gaalooy.

قُلْ يَٰٓأَيُّهَا ٱلْكَٰفِرُونَ ﴿١﴾

2. Ma caabudayo waxaad caabudaysaan.

لَآ أَعْبُدُ مَا تَعْبُدُونَ ﴿٢﴾

3. Idinna ma caabudaysaan Allaha aan caabudi.

وَلَآ أَنتُمْ عَٰبِدُونَ مَآ أَعْبُدُ ﴿٣﴾

4. Mana caabudin waxaad caabuddeen.

وَلَآ أَنَا۠ عَابِدٌ مَّا عَبَدتُّمْ ﴿٤﴾

5. Idinkuna (hadda) ma caabudaysaan Allaha aan caabudi.

وَلَآ أَنتُمْ عَٰبِدُونَ مَآ أَعْبُدُ ﴿٥﴾

6. Idinkana diintiinna yaad leedihiin (oo idiin gaar ah, beri ayaanan ka ahay), anna diintaydaan leeyahay (oo ii gaar ah, ilamana wadaagtaan, aayaddana kuma jirto in gaalnimadooda la oggol yahay).

لَكُمْ دِينُكُمْ وَلِيَ دِينِ ﴿٦﴾

Suuraddani waxay soo dagtay markii gaaladii quraysheed ay Nabiga waydiisteen inuu ilaahyadooda (sanamyadooda) sano caabudo, iyana Ilaahiisa ay sano caabudaan, markaasaa Alle soo dajiyay suuraddan, maxaa yeelay Ilaahay wax ka soo hadhay oo la caabudo ama laga macbuud yeesho ma aha isku soo dhawaansho, ee waxaa isku soo dhawaansha ah xumaantoo laga tago, iyo wanaaggoo la raaco, waxayna ku tusin suuraddu inaan ruuxna qasab lagu islaaminin. Rasuulkii Alle na wuxuu ahaa «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee» markuu seexanayo kii akhriya suuraddan ilaa uu ka dhammeeyo. Waxaa wariyay Dabaraani. **[Al-Kaafiruun: 1-6].**

Suurat An-Nasr

سُورَةُ النَّصۡرِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

إِذَا جَآءَ نَصۡرُ ٱللَّهِ وَٱلۡفَتۡحُ ﴿١﴾

1. Markuu yimaaddo gargaarkii Alle iyo fatxiga (furashada Maka).

وَرَأَيۡتَ ٱلنَّاسَ يَدۡخُلُونَ فِي دِينِ ٱللَّهِ أَفۡوَاجٗا ﴿٢﴾

2. Ood aragtid dadkoo diinta Alle u soo gali kooxo.

فَسَبِّحۡ بِحَمۡدِ رَبِّكَ وَٱسۡتَغۡفِرۡهُۚ إِنَّهُۥ كَانَ تَوَّابَۢا ﴿٣﴾

3. U tasbiixso Alle adoo ku mahadin dambidhaafna waydiiso illeen waa dambidhaaf badanee.

Suuraddani waxay soo dagtay ayaamihii u dambeeyay ee noloshii Nabiga naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee, isagoo Alle fari in marka magaalada barakaysan ee maka la soo celiyo dadkuna islaannimada koox koox u galaan inuu Nabigu cibaadada Alle badiyo kana toobad dalbo. Waxayna ku tusin suuraddu nicmadoo lagu shukriyo, iyo in Alle diintiisa u gargaari, waxaa kaloy ku tusisay ajashii Nabiga ammaan iyo naxariis korkiisa Alle ha yeelee. Nin daris u ahaa Jaabir bini Cabdillaahi yaa wuxuu yidhi: waxaan ka soo galay safar markaasuu ii yimid Jaabir bini Cabdillaahi ina salaamay, markaasaan uga sheekeeyay suu dadku u kala tagay iyo waxay la yimaadeen markaasuu Jaabir ooyay, isagoo leh: waxaan Rasuulkii Alle ka maqlay naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee isagoo leh (dadku waxay ku galeen diinta Alle kooxo, waxayna uga bixi doonaan kooxo). Waxaa wariyay Imaam Axmad. **[An-Nasr: 1-3].**

Suurat Al-Masad

سُورَةُ ٱلْمَسَدِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaa khasaaray gacmihii abuulahab, halaagmayna.

تَبَّتْ يَدَآ أَبِى لَهَبٍ وَتَبَّ ﴿١﴾

2. Waxna uma tarin xoolihiisii iyo wuxuu kasbadayna.

مَآ أَغْنَىٰ عَنْهُ مَالُهُۥ وَمَا كَسَبَ ﴿٢﴾

3. Wuxuuna gali naar olol leh.

سَيَصْلَىٰ نَارًا ذَاتَ لَهَبٍ ﴿٣﴾

4. Haweenaydiisii qoryaha (qodxaha leh) xambaari jirtayna (si ay Nabiga u waxyeelleyso, waxay gali naar).

وَٱمْرَأَتُهُۥ حَمَّالَةَ ٱلْحَطَبِ ﴿٤﴾

5. Luqunteedana waxaa la yeeli xadhig liif ah.

فِى جِيدِهَا حَبْلٌ مِّن مَّسَدٍ ﴿٥﴾

Suuraddani waxay soo dagtay Nabigu naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Alle ha yeelee mar uu koray goor subax ah buurta Safa dadkana u yeedhay kuna yidhi: haddaan col idin soo weerari idiin sheego ma i rumaysanaysaan, markaasay dheheen waannu ku rumaysan runna waannu kugu naqaannaa, markaasuu yidhi: haddaba waxaan idiinka digi caddibaadda Alle, Abuu Lahabbaa markaa yidhi: khasaare ha kugu dhecee ma waxaasaad noogu yeedhay? Waxayna ku tusin suuraddu inaan qaraabannimo iyo xoolo, iyo carruur midna wax taraynin hadduu ruux dhumo xaqana ka leexdo, sida Abii-Lahab iyo haweenaydiisii xumaanta ku taageertay. **[Al-Masad: 1-5].**

Suurat Al-Ikhlaas

سُورَةُ الإِخْلَاصِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaad dhahdaa (Nabiyow) Alle waa kali (wehelna ma leh).

قُلْ هُوَ ٱللَّهُ أَحَدٌ ﴿١﴾

2. Waana sayid dhammaystiran (oo deeqtoon).

ٱللَّهُ ٱلصَّمَدُ ﴿٢﴾

3. Alle wax ma dhalin, isna lama dhalin.

لَمْ يَلِدْ وَلَمْ يُولَدْ ﴿٣﴾

4. Wax la mid ahna ma jiro.

وَلَمْ يَكُن لَّهُۥ كُفُوًا أَحَدٌۢ ﴿٤﴾

Suuraddani waa suurad gaaban, hasa yeeshee waa suurad aad iyo aad u wayn, waxayna soo dagtay markay gaaladii qureesheed Nabiga ku dheheen Rabbigaada noo tilmaan, wuxuuna Alleheen ku caddeeyay suuraddan inuu kali yahay, maxaa yeelay wehel uma baahna, inuu sayid kaaftoon yahay dadkuna u baahan yihiin, inuusan wax dhalin siday gaalada qaarkood sheegtay, wax la mid ahna uusan jirin. Bukhaari wuxuu wariyey inaan Alle cidna uga adkaysin badnayn dhibuu maqlay, ilmay u sheegeen isna wuu arsuqaa oo caafiyaa. Hadalkii Alle ee qudsiga ahaa waxaa ku sugnaaday: ibnu Aadam wuu i beeniyey kumana habboona, wuuna i caayey kumana habboona, beenintiisu waa inuu yidhi iima soo celiyo siduu igu billaabay, billawguna iigama fududa soo celinta, caydiisuna waa inuu yidhi: Alle ilmuu yeeshay, anna waxaan ahay keli, sayid ah, mana dhalin laymana dhalin, wax ila mid ahna ma jiro. Waxaa wariyey Bukhaari. **[Al-Ikhlaas: 1-4].**

Suurat Al-Falaq

سُورَةُ الفَلَقِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaad dhahdaa (Nabiyow) waxaan ka magan galay Rabbiga subaxa (abuuray).

قُلْ أَعُوذُ بِرَبِّ ٱلْفَلَقِ ﴿١﴾

2. Wixii shar leh sharkiisa.

مِن شَرِّ مَا خَلَقَ ﴿٢﴾

3. Iyo habeenka sharkiisa markuu madoobaado.

وَمِن شَرِّ غَاسِقٍ إِذَا وَقَبَ ﴿٣﴾

4. Iyo sharka sixirrowga wax ku tufa guntimaha.

وَمِن شَرِّ ٱلنَّفَّٰثَٰتِ فِى ٱلْعُقَدِ ﴿٤﴾

5. Iyo sharka xaasidka wax xasda.

وَمِن شَرِّ حَاسِدٍ إِذَا حَسَدَ ﴿٥﴾

Suuraddani waxay caddayn ku xidhnaanta Alle iyo ka magangalkiisa wixii wax dhiba sida sixirka, xaasidka iyo wax kastoo xun. Caa'isha waxaa laga wariyey in Rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgelyo korkiisa Alle ha yeelee) markuu xanuunsado uu isku akhrin jiray mucawadataynka (labada magangelyo) iskuna tufi jiray, markuu xanuunku ku darraadayna aan ku akhrin jiray magangalyooyinka gacantiisana jidhkiisa ku masixi jiray barako darteed. Waxaa weriyay Bukhaari, Imaamu Maalik, Abuu Daa'uud iyo Nasaa'i. **[Al-Falaq: 1-5].**

Suurat An-Naas

سُورَةُ ٱلنَّاسِ

Magaca Alle yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

قُلْ أَعُوذُ بِرَبِّ ٱلنَّاسِ ﴿١﴾

1. Waxaad dhahdaa (Nabiyow) waxaan ka magan galay Rabbiga dadka barbaariya.

مَلِكِ ٱلنَّاسِ ﴿٢﴾

2. Ee dadka xukuma.

إِلَٰهِ ٱلنَّاسِ ﴿٣﴾

3. Ee ah Ilaaha dadka.

مِن شَرِّ ٱلْوَسْوَاسِ ٱلْخَنَّاسِ ﴿٤﴾

4. Sharka (iyo xumaanta) waswaasiyaha qarsooma (marka Alle la xuso).

ٱلَّذِى يُوَسْوِسُ فِى صُدُورِ ٱلنَّاسِ ﴿٥﴾

5. Ee waswaasiya laabta (qalbiga) dadka.

مِنَ ٱلْجِنَّةِ وَٱلنَّاسِ ﴿٦﴾

6. (Kuwaas wax waswaasinaya) oo ah jinni iyo insiba.

Sidaa oo kale waxay suuraddan sheegi in Rabbiga awoodda leh laga magan galo xumaanta iyo sharka kuwa wax dhibaya waxna waswaasinaya, xumaanloowgana ah, ama jinni ha ahaadeen ama insi ha ahaadeene. Waxaa dhab ah in had iyo jeer ay jiraan dhibayaal warxumatashiila, dadka ka qasa diintiisa, aakharadiisa, iyo noloshiisaba. Hadaba waa in kuwaas Alle laga hoos galaa, lagana digtoonaadaa. Abuu Darri waxa laga wariyay inuu yidhi: waxaan u imid Rasuulkii Alle «naxariis iyo nabad gelyo korkiisa Alle ha yeelee» oo masjidka jooga markaasaan fariistay wuxuuna yidhi: «Abuu Dar ma tukatay?» Waxaan idhi: maya, wuxuu yidhi: «istaag oo tuko» wuxuu yidhi: waan istaagay oo waan tukaday, waana fariistay, markaasuu yidhi: «Abuudar ka magangal Alle sharka shayaadiinta insiga iyo jinniga», markaasuu yidhi waxaan idhi: Rasuulki Allow insigu ma shayaadiin buu leeyahay? Markaasuu yidhi: «haa». Waxaa wariyay Imaam Axmad iyo Ibnu Maajah. **[An-Naas: 1-6].**

فِهرِسُ بأسماءِ السُّوَرِ وبيانِ المكيِّ والمدنيِّ منها

Tusmada magacda suuradaha iyo caddeeynta tan Makkaad iyo tan Madiinaad

Tirada	Magaca Suuradda	Bogga	Caddeyn	السورة
1	Al-Faatixah	1	Makkaad	الفاتحة
2	Al-Baqarah	3	Madiinaad	البقرة
3	Aali-Cimraan	88	Madiinaad	آل عمران
4	An-Nisaa’	138	Madiinaad	النساء
5	Al-Maa’idah	186	Madiinaad	المائدة
6	Al-Ancaam	226	Makkaad	الأنعام
7	Al-Acraaf	270	Makkaad	الأعراف
8	Al-Anfaal	321	Madiinaad	الأنفال
9	At-Tawbah	340	Madiinaad	التوبة
10	Yuunus	377	Makkaad	يونس
11	Huud	403	Makkaad	هود
12	Yuusuf	432	Makkaad	يوسف
13	Ar-Racd	459	Madiinaad	الرعد
14	Ibraahiim	472	Makkaad	إبراهيم
15	Al-Xijr	485	Makkaad	الحجر
16	An-Naxl	498	Makkaad	النحل
17	Al-Israa’	526	Makkaad	الإسراء
18	Al-Kahf	552	Makkaad	الكهف
19	Maryam	576	Makkaad	مريم
20	Dhaahaa	591	Makkaad	طه
21	Al-Anbiyaa’	611	Makkaad	الأنبياء
22	Al-Xajj	629	Madiinaad	الحج
23	Al-Mu’minuun	647	Makkaad	المؤمنون
24	An-Nuur	663	Madiinaad	النور
25	Al-Furqaan	682	Makkaad	الفرقان
26	Ash-Shucaraa’	696	Makkaad	الشعراء
27	An-Naml	719	Makkaad	النمل

Tirada	Magaca Suuradda	Bogga	Caddeyn	السورة
28	Al-Qasas	737	Makkaad	القصص
29	Al-Cankabuut	757	Makkaad	العنكبوت
30	Ar-Ruum	771	Makkaad	الروم
31	Luqmaan	783	Makkaad	لقمان
32	As-Sajdah	791	Makkaad	السجدة
33	Al-Axzaab	797	Madiinaad	الأحزاب
34	Saba’	816	Makkaad	سبإ
35	Faadhir	829	Makkaad	فاطر
36	Yaasiin	840	Makkaad	يس
37	As-Saaffaat	852	Makkaad	الصافات
38	Saad	870	Makkaad	ص
39	Az-Zumar	883	Makkaad	الزمر
40	Ghaafir	900	Makkaad	غافر
41	Fussilat	918	Makkaad	فصِّلت
42	Ash-Shuuraa	929	Makkaad	الشورىٰ
43	Az-Zukhruf	941	Makkaad	الزخرف
44	Ad-Dukhaan	955	Makkaad	الدخان
45	Al-Jaathiyah	961	Makkaad	الجاثية
46	Al-Axqaaf	968	Makkaad	الأحقاف
47	Muxammad	977	Madiinaad	محمد
48	Al-Fatx	985	Madiinaad	الفتح
49	Al-Xujuraat	993	Madiinaad	الحجرات
50	Qaaf	998	Makkaad	ق
51	Ad-Daariyaat	1005	Makkaad	الذاريات
52	Ad-Duur	1012	Makkaad	الطور
53	An-Najm	1018	Makkaad	النجم
54	Al-Qamar	1025	Makkaad	القمر
55	Ar-Raxmaan	1032	Madiinaad	الرحمن
56	Al-Waaqicah	1040	Makkaad	الواقعة

Tirada	Magaca Suuradda	Bogga	Caddeyn	السورة
57	Al-Xadiid	1048	Madiinaad	الحديد
58	Al-Mujaadalah	1056	Madiinaad	المجادلة
59	Al-Xashr	1062	Madiinaad	الحشر
60	Al-Mumtaxinah	1068	Madiinaad	الممتحنة
61	As-Saff	1073	Madiinaad	الصف
62	Al-Jumucah	1077	Madiinaad	الجمعة
63	Al-Munaafiquun	1080	Madiinaad	المنافقون
64	At-Taghaabun	1083	Madiinaad	التغابن
65	Adh-Dhalaaq	1087	Madiinaad	الطلاق
66	At-Taxriim	1091	Madiinaad	التحريم
67	Al-Mulk	1095	Makkaad	الملك
68	Al-Qalam	1101	Makkaad	القلم
69	Al-Xaaqqah	1107	Makkaad	الحاقة
70	Al-Macaarij	1112	Makkaad	المعارج
71	Nuux	1117	Makkaad	نوح
72	Al-Jinn	1121	Makkaad	الجن
73	Al-Muzzammil	1125	Makkaad	المزمل
74	Al-Muddathir	1128	Makkaad	المدثر
75	Al-Qiyaamah	1133	Makkaad	القيامة
76	Al-Insaan	1137	Madiinaad	الإنسان
77	Al-Mursalaat	1141	Makkaad	المرسلات
78	An-Naba’	1145	Makkaad	النبإ
79	An-Naazicaat	1149	Makkaad	النازعات
80	Cabasa	1153	Makkaad	عبس
81	At-Takwiir	1157	Makkaad	التكوير
82	Al-Infidhaar	1160	Makkaad	الانفطار
83	Al-Mudhafifiin	1162	Makkaad	المطففين
84	Al-Inshiqaaq	1166	Makkaad	الانشقاق
85	Al-Buruuj	1169	Makkaad	البروج

Tirada	Magaca Suuradda	Bogga	Caddeyn	السورة
86	Adh-Dhaariq	1172	Makkaad	الطارق
87	Al-Aclaa	1174	Makkaad	الأعلى
88	Al-Ghaashiyah	1176	Makkaad	الغاشية
89	Al-Fajr	1179	Makkaad	الفجر
90	Al-Balad	1182	Makkaad	البلد
91	Ash-Shams	1184	Makkaad	الشمس
92	Al-Layl	1186	Makkaad	الليل
93	Ad-Duxaa	1188	Makkaad	الضحى
94	Ash-Sharx	1190	Makkaad	الشرح
95	At-Tiin	1191	Makkaad	التين
96	Al-Calaq	1192	Makkaad	العلق
97	Al-Qadr	1194	Makkaad	القدر
98	Al-Bayyinah	1195	Madiinaad	البينة
99	Az-Zalzalah	1197	Madiinaad	الزلزلة
100	Al-Caadiyaat	1198	Makkaad	العاديات
101	Al-Qaaricah	1199	Makkaad	القارعة
102	At-Takaathur	1201	Makkaad	التكاثر
103	Al-Casr	1202	Makkaad	العصر
104	Al-Humazah	1203	Makkaad	الهمزة
105	Al-Fiil	1204	Makkaad	الفيل
106	Quraysh	1205	Makkaad	قريش
107	Al-Maacuun	1206	Makkaad	الماعون
108	Al-Kawthar	1207	Makkaad	الكوثر
109	Al-Kaafiruun	1208	Makkaad	الكافرون
110	An-Nasr	1209	Madiinaad	النصر
111	Al-Masad	1210	Makkaad	المسد
112	Al-Ikhlaas	1211	Makkaad	الإخلاص
113	Al-Falaq	1212	Makkaad	الفلق
114	An-Naas	1213	Makkaad	الناس

إنَّ وزارةَ الشُّؤونِ الإسلاميَّةِ والدَّعوةِ والإرشادِ

في المملكةِ العربيَّةِ السُّعوديَّةِ

المشرفةَ على

مجمَّعِ الملكِ فهدٍ لطباعةِ المصحفِ الشَّريفِ

في المدينةِ المنوَّرةِ

إذ يسُرُّها أن يُصدِرَ المجمَّعُ هذهِ الطَّبعةَ مِن

ترجمةِ معاني القرآنِ الكريمِ

إلى اللُّغةِ الصُّوماليَّة

تسألُ اللهَ أن ينفعَ بها النَّاسَ

وأن يجزيَ

خادمَ الحرمينِ الشَّريفينِ الملكَ سلمانَ بنَ عبدِ العزيزِ آلَ سعودٍ

أحسنَ الجزاءِ على جُهودِهِ العظيمةِ في نشرِ كتابِ اللهِ الكريمِ

واللهُ وليُّ التَّوفيقِ

Wasaaradda arrimaha islaamka, dacwada iyo hanuuninta Ee Boqortooyada Sacuudi Carabiya Dushana ka maamusha Mujammaca Boqor Fahad Ee Daabacadda Jaamaca Sharafta Badan, kuna yaalla Madiinah Munawwara, iyadoo ku faraxsan in Mujammacu soo saaro Dabcaddan Quraanka Sharafta Leh iyo Tarjamada Afka Soomaaliga Ee Macnihiisa, waxay Alla weydiisanaysaa inuu dadka ku anfaco, Abaalmarin tan u wanaagsanna ka siiyo Adeegaha labada Xaram ee Sharafta Leh Boqor Salmaan ina Cabdulcaziiz, Reer Sucuud, dadaalkiisa dheeraadka ah ee uu ku faafinaayo kitaabka Alle ee wanaagsan Waafajintana Allaa iska leh.

حقوق الطبع محفوظة
لمجمع الملك فهد لطباعة المصحف الشريف

ص.ب ٦٢٦٢ - المدينة المنوّرة
www.qurancomplex.gov.sa
contact@qurancomplex.gov.sa

Xuquuqda Daabiciddu waa dhowran tahay waxaana
Leh Mujammaca Boqor Fahad Ee Daabacaadda
Jaamaca Sharafta Badan

S.B. 6262 - Al-Madiinah Al-Munawarah
www.qurancomplex.gov.sa
contact@qurancomplex.gov.sa

مجمع الملك فهد لطباعة المصحف الشريف، ١٤٤٤هـ
فهرسة مكتبة الملك فهد الوطنية أثناء النشر

مجمع الملك فهد لطباعة المصحف الشريف
ترجمة معاني القرآن الكريم إلى اللغة الصومالية
مجمع الملك فهد لطباعة المصحف الشريف - المدينة المنورة، ١٤٤٤هـ

...ص ؛ ١٣,٥ × ١٩,٣ سم

ردمك: ٠-٠٠-٠٠٠٠-٠٠٠-...

١- القرآن - ترجمة - اللغة الصومالية أ. العنوان
ديوي ١٤٤٤/٠٠٠٠

رقم الإيداع: ١٤٤٤/٠٠٠٠

ردمك: ٠-٠٠-٠٠٠٠-٠٠٠-...

تصفح الترجمة
akhriso tarjamada